




The book cover features a dark blue background with intricate gold-colored Islamic geometric and floral patterns. A large, ornate gold medallion is centered on the cover, containing the title and author information. The medallion has a scalloped, scalloped border and a pointed top and bottom. The text is in a serif font, with the title in all caps and the author's name in title case. The entire cover is framed by a wide, decorative gold border with repeating geometric motifs.

QURAANKA KARIIMKA

Iyo Tarjamada
Macnihiisa Ee Afka
Soomaaliga

Kiisabkan waxaa Allash dartii u waqfay Adeegaha
labada xaram ee sharafta badan, Boqor Fehad
ina Cabdil Caziiz, Reer Sucuud,
iibkiisuna ma benneane.

اتلوا القرآن الكريم واليه المرجع والمآب



Waxaa ku Sharaf Mutay Amarka Daabicidda
Jaamacan Sharafta Badan Iyo Tarjamada Macnihiisa
Adeegaha Labada Xaram Ee Sharafta Badan
Boqor Fahad Cabdulcaziiz, Reer Sucuud,
Boqarka Boqortooyada Sucuudi Carabiya

قد روى بالامر نبط اعاد هذا المصحف الشريف وترجمه معانيه
خلال المرحومين الملائمة في مكة المكرمة في شهر ربيع الأول سنة 1410
ملك المقامات في العربية من السعود ربه



مجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف




**QURAANKA
KARIIMKA**

Iyo Tarjamada
Macnihiisa Ee Afka
Soomaaliga

Mujammaca Boqor Fahad
ee daabacaadda musxafka sharafta leh

وَقَفَّ لِلَّهِ تَعَالَى مِنْ خَادِمِ الْحَرَمَيْنِ الشَّرِيفَيْنِ
الْمَلِكِ فَهْدِ بْنِ عَبْدِ الْعَزِيزِ آلِ سُعُودٍ
وَلَا يَبْجُوزُ بَيْعُهُ

سنة ١٢٤٠



(Waxaa lagu ceybi karaa la'aan)

Kitaabkan waxaa Allaah dartii u waqfay Adeegaha
labada xaram ee sharafta badan, Boqor Fahad
ina Cabdil Caziz, Reer Sucuud,
iibkiisuna ma bannaana.

القرآن الكريم

وترجمة معانية إلى
اللغة الصومالية

**QURAANKA
KARIIMKA**

Iyo Tarjamada
Macnihiisa Ee Afka
Soomaaliga

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

مقدمة

بقلم: معالي الشيخ
صالح بن عبد العزيز بن محمد آل الشيخ
وزير الشؤون الإسلامية والأوقاف والدعوة والإرشاد
المشرف العام على المجمع

الحمد لله رب العالمين، القائل في كتابه الكريم:
﴿... قَدْ جَاءَكُمْ مِنَ اللَّهِ نُورٌ وَكِتَابٌ مُبِينٌ﴾.
والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين، نبينا محمد، القائل:
«خيركم من تعلم القرآن وعلمه».

أما بعد،

فإنفاذاً لتوجيهات خادم الحرمين الشريفين، الملك فهد بن عبد العزيز آل سعود، حفظه الله، بالعبارة بكتاب الله، والعمل على تيسير نشره، وتوزيعه بين المسلمين، في مشارق الأرض ومغاربها، وتفسيره، وترجمة معانيه إلى مختلف لغات العالم.
وإيماناً من وزارة الشؤون الإسلامية والأوقاف والدعوة والإرشاد بالمملكة العربية السعودية، بأهمية ترجمة معاني القرآن الكريم، إلى جميع لغات العالم المهمة، تسهيلاً لفهمه على المسلمين الناطقين بغير العربية، وتحقيقاً للبلاغ، المأمور به في قوله ﷺ: «بلغوا عني ولو آية».

وخدمة لإخواننا الناطقين باللغة الصومالية يطيب لمجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف بالمدينة المنورة أن يقدم للقارئ الكريم هذه الترجمة باللغة الصومالية التي قام بها الشيخ محمود محمد عبده، وراجعها الشيخ عبد الرحمن شيخ عمر أحمد دينله ومن قبل المجمع كل من: فضيلة الدكتور عثمان معلم محمود شيخ وفضيلة الدكتور أحمد هادي شيخ علي الكيني.

ونحمد الله سبحانه وتعالى أن وفق لإنجاز هذا العمل العظيم الذي نرجو أن يكون خالصاً لوجهه الكريم، وأن ينفع به الناس.

إننا لنذكر أن ترجمة معاني القرآن الكريم - مهما بلغت دقتها - ستكون قاصرة عن أداء المعاني العظيمة التي يدل عليها النص القرآني المعجز، وأن المعاني التي تؤديها الترجمة إنما هي حصيلة ما بلغه علم المترجم في فهم كتاب الله الكريم، وأنه يعترها ما يعترى عمل البشر كله من خطأ ونقص.

ومن ثم نرجو من كل قارئ لهذه الترجمة أن يوافي مجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف بالمدينة النبوية بما قد يجده فيها من خطأ أو نقص أو زيادة للإفادة من الاستدراكات في الطبعات القادمة إن شاء الله.

والله الموفق، وهو الهادي إلى سواء السبيل، اللهم تقبل منا إنك أنت السميع العليم.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Hordhac

Waxaa qoray: Saalix Cabdicaziiz Muxammad Aala sheekh Waziirka Arrimaha Islaamka, owqaafta, dacwada iyo hanuuinta, Kormeeraha Guud ee Mujammaca.

Mahad dhammaanteed Allaa iska leh, ee ku yiri kitaabkiisa sharafta leh: (Alla Xagii waxaa idinkaga yimid Nuur (Nebi Muxammad) صلى الله عليه وسلم iyo kitaab kala Caddeeya (oo Qur'aanka ah).

Ammaan iyo Nabadgelyana nebigenna Muxammad ah ee ugu sharafta badan Nebiyada iyo kuwa la soo diray dushiisha Allah yeelo, Ee Yiri: "Waxaa idinkugu kheyir badan kan barta Qur'aanka, dadka kalena bara" Intaa Ka dib:

Waxaa Farxad u ah Mujammaca Boqor Fahad ee daabacaadda kitaabka Jaamaca ah ee sharafta badan kuna yaal Madina Al-Munawara, inuu u soo gudbiyo aqristaha sharafta leh tarjamada macnaha Quraanka Kariimka ah ee uu afsoomaaliga ku qoray Sheekh Maxamuud Maxamed Cabdi, uuna dib ueegay Sheekh Cabdiraxmaan Sheekh Cumar Axmed Diinle.

Dhinaca Mujammacana waxaa dib u cegay Dr.Cismaan Macallin Maxamuud Sheekh iyo Dr. Axmed Hadi sheekh Cali.

Sidaana waxaan u Sameynay:

- 1) iyadoo La fulinayo talooyinki habboonaa ee u adeegaha Labada Xaram ee Sharafta leh Boqor Fahad Cabdilaaziiz, Reer Sucuud, Allaha dhowree, talooyinkaasoo ku saabsanaa in la iska xilsaaro kitaabka Alle, laguna dadaalo sidii loo fududeyn lahaa baahiddiisa, loona kala gaarsiin lahaa Muslimiinta ku kala nool Addoonka Dacalladiisa, Sidoo kalana in lugu dadaalo fasiraadda kitaabka Alle iyo in Macnihiisa loo tarjamo afafka kala geddisan ee Dunida.
- 2) Rumeysnaan ay rumaysan tahay wasaaradda Arrimaha Islaamka, Owqaafta, Dacwada iyo Hanuuinta ee Boqortooyada Sacuudi Carabiya Mudnaanta ay leedahay Tarjamidda macnayaalka Qur'aanka kariimka ah luqooyinka Adduunyada kuwooda Muhimka ah, si loogu fududeeyo fahamkiisa Muslimiinta aan afcarabiga ku hadlin, iyo iyadoo laga dhabaynayo Gaarsiinti la isku faray hadalki Rasuulka: "صلى الله عليه وسلم" Koley aayad noqotaba dadka diinka iga gaarsiiya"
- 3) iyo Sidoo kale adeeg loo adeegayo walaaleheenna afka Soomaaliga ku hadla.

Allaa baanan uga mahad Celinaynaa inuu na waafajiyay ka miradhalinta howshan weyn ee aan rajeyneyno in Alle Dadka ku anfaco, dar Allana loola jeeday.

Annaku waxaannu dareensannahay - si kastoo tarjamada loogu dadaalo - inaanay ka gungaari Karin gudashada Macaanida waaweyn ee aad ka heleyso erayada qur'aanka kariimka ah ee aan iyadoo kele lala imaan Karin.

Sidoo kale waxaa la soo gudboonaanaya Tarjamada gefka iyo nusqaanta la soo gudboonaata howl kastoo Bani'aadan qabto.

Sidaas darteed waxaannu ka rajeyneynaa qof kastoo akhriya Tarjamadan in uu Mujammaca soo gaarsiiyo waxkastoo khalad ah (siyaado ama nusqaan) oo ay dhici karto in uu ka dhex helo, si ay uga qayb qaataan sixidda daabacadaha soo socda, haddii Alle idmo.

Allana waa midka waafajiyay kheyirka qofka uu jecel yahay, waana midka jidka toosan ku hanuuniya dadka.

Allow naga aqbal shaqadan wanaagsan, Adigu waxaad tahay midka maqalkiisu Xeel dheer yahay, ee aad u cilmiga badan.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الحمد لله الذي أنزل على عبده الكتاب ولم يجعل له عوجاً، والصلاة والسلام على رسوله الأمين محمد صلى الله عليه وعلى آله وأصحابه الكرام البررة ومن تبعهم بإحسان إلى يوم الدين وبعد:

أحمد الله تعالى الذي مكنتني أن أسهم في كتابة معاني القرآن الكريم، والواقع أن هذا العمل ليس بالأمر الهين، ولكن بعون الله وقدرته تُذلل الأمور، لذا شرعت في هذا العمل. ومن الأسباب التي جعلتني أكتب ما يلي:

١ - أن يكون هذا العمل لي ذخراً عند الله يوم تجد كل نفس ما عملت من خير محضراً.

٢ - الإسهام في خدمة القرآن الكريم وتوضيح معانيه للناطقين باللغة الصومالية، والذين تصعب عليهم اللغة العربية عسى الله أن يفهمهم به.

٣ - أن كثيراً من اللغات في العالم الإسلامي قد شاركت في هذا الموضوع لتتم الفائدة، غير أنه تبدو الحاجة والفراغ من جانب اللغة الصومالية.

٤ - حدث أن تُرجمت بعض الكتب غير الإسلامية باللغة الصومالية ووزعت على المسلمين وخاصة اللاجئين منهم فلا بد من تحرك تجاه ذلك.

هذه الأسباب وغيرها جعلتني آخذ عملي هذا مستمداً من الله العلي القدير العون والسداد، هذا، ولربما يقال لماذا تكتب معاني القرآن الكريم وتفسر باللغة الصومالية ولم يترك الناس يتعلمون اللغة العربية؟ حسناً: ولكن هل هذا يمنع تعلم اللغة العربية والاستفادة منها؟

أوليس العلماء الصوماليون كانوا يفسرون ويوضحون معاني القرآن الكريم - ولا يزالون - باللغة الصومالية عبر القرون والأجيال شفوياً في حلقات المساجد وغيرها؟

وكان لذلك الأثر الطيب والسبب في رسوخ قدم الإسلام في هذه المنطقة. وليس هناك فرق بين التوضيح بالمشافهة وبين الكتابة مع أننا نرى بالتأكيد ضرورة تعلم لغة القرآن (العربية) كما نرى أيضاً ضرورة فهم معاني القرآن العظيم بأي طريق خيرةً ونبيلة، وهل الأولى القعود والانتظار بدون عمل أو بذل الجهود في خدمة القرآن المجيد؟

وإذا نظرت إلى أسلوب الكتاب فأنت تدرك أنه لم تفسر معاني القرآن الكريم كله سابقاً باللغة الصومالية حسب علمي، وأن اللغة الصومالية في طور نموها. النقطة الثانية: هناك بعض حروف عربية لا توجد في الصومالية ومع تحري

عدم كتابتها حسب المستطاع فإنه ستواجهك حتماً في بعض الأحيان مثل حرف (ث) المثلثة حيث أخذنا بدلها حرف (TH) وحرف (ز) الزاي الذي أخذنا بدله حرف (z) في أكثر الحالات وربما حدث ذلك في حروف أخرى، وقد كتب النص القرآني باللغة العربية تحمل كل آية رقمها وفي مقابله معاني القرآن الكريم باللغة الصومالية إلا أن الأرقام تأتي بالآيات في النهاية وفي المعاني في البداية. ولم أكلف نفسي بترجمة معاني القرآن الكريم حرفياً، بل حاولت توضيح معانيه بإيجاز، وهناك فرق بين الأمرين (فيما أعتقد) حيث الأخير مجرد تفسير للقرآن الكريم.


نقطة أخرى، لم أبحث عن لهجة خاصة صومالية قدر المستطاع بل تحريت الصومالية الشائعة ومع ذلك قد يبدو للبعض وجهة نظر.

وفي نهاية كل مجموعة من الآيات القرآنية وترجمة معانيها شرح موجز يشمل معاني الآيات المرتبط بعضها ببعض وفي بعض الحالات نورد حديث الرسول صلى الله عليه وسلم أو قول صحابي أو عالم من علماء الإسلام المعروفين، أو تنبيهاً على حكم أو مسألة، أو بيان السبب الذي نزلت به السورة أو الآية، كل ذلك باختصار، لأن الكلام لا ينتهي حتى ينتهي الناس، ونحن قصدنا فهم جانب من معاني القرآن المبين، لا أن نذكر كل ما ورد فيها، والإسهاب يتعب إذا كان مفرطاً، ومع أننا قد بذلنا جهدنا في أن نقرب معنى الآية في حدود الإمكان وراجعنا كتباً كثيرة حجة في هذا الموضوع خلال خمس سنوات من رحلتنا مع القرآن، مع كل ذلك لا بد أن تقع هفوات، بيد أننا نتضرع إلى المولى القدير التواب الرحيم أن يتجاوز عنا ما صدر منا من هفوات وأن يرزقنا النية الصالحة والعمل الطيب المتقبل إنه قريب مجيب.

وفضل كتاب الله الحكيم وعظمه، وفضل الاشتغال به تعلماً، ودراية وحفظاً وقراءة وتدبراً وتعليماً واتباع تعاليمه القيمة والعمل به مما لا يخفى على دارسيه. ونسأل الله جل وعلا أن يغفر لنا ولوالدينا وللمسلمين عامة، ولكل من له يدٌ خيرٌ في إنجاح هذا العمل، ولكل من يستفيد منه من المؤمنين إنه نعم المولى ونعم النصير.

وقد تم بحمد الله بتاريخ ١١/٧ لعام ١٤٠٥هـ.

محمود محمد عبده



Hordhac

Mahad Eebaa iska leh ee ah kan ku soo Dejiyey Nabigiisa Kitaabka Quraanka ah ee Toosan, Naxariis iyo Nabad galyana ha ahaato Rasuulka Muxamed ah korkiisa iyo Ehelkiisii iyo Asaxaabtiisii iyo inta Wanaagag ku raacda tan iyo Qiyaamada.

INTAAS KA DIB:

Waxaan ku Mahadin Eebaheenna Sarreeye ee ii suuro galiyey inaan ka Qayb qaato Qoridda Macnaha Quraanka Sharfta leh. Sida dhabta ahna Camalkani ma fududa, hasayeeshee kaalmaha Eebe iyo Awooddiisa yey arrimuhu ku Jilcaan, saas darteed yaan u Gudogalay Arrintan. Sababaha igu Xambaaray inaan Qorana waxaa ka mida:

1. Inuu ii noqdo Camalkani kayd Eebe Agtiisa, Maalintay Naf kasta heli waxay Camal fashay oo khayra oo Muuqda.
2. Inaan ka qayb qaato u Adeegidda Kitaabka Eebe ee Quraanka Kariimka ah, iyo u caddaynta Macnihiisa Dadka garan Luuqada Soomaaliga ah, ee ay ku adagtahay Luuqada Carabiga ah illeen waxay u Dhawdahay in Eebe ku Anfatee.
3. Wax badan oo Luuqadaha ka mida waxay ka Qayb Qaateen Caalamka Islaamka Arrintan si faa'iidayda u badato, Laakiin waxay ka Muuqataa Baahi iyo Banaani xagga Luuqada Soomaaliga ah.
4. Waxaa Dhacday in lagu Turjumay Kutubo badan oon Islaam ahayn Luuqada Soomaaliga ah, Luguna qaybiyo Muslimiinta, gaar ahaan Qoxootiga, markaas waxaa lagama maarmaan noqotay in wax laga qabto Arrintaas.

Sababahaas iyo kuwo kale yaa igu xambaaray Billaabidda Camalkan, Annagoo ka kaalo warsan Eebaha sare ee kara inuu na Toosiyoo, nana Xoojiyoo. Waxaa laga yaabaa in Dad iswarsado maxaa loogu fasiri Macnaha Quraan Luuqada Soomaaliga ah oon loo dayn Dadku ha barten Luuqada Carabiga ahe, waa Fiicantahay, miyeyse isdiidi in Quraanka Macnihiisana Luuqada Soomaaliga ah lagu Fasiro, isla markaas Dadku barto kana Faa'iidaysto Luuqada Carabiga ah, sow ma ahayn Culimadii hore ee Soomaalida ahaa kuwii Dadka ugu fasiri jiray uguna Caddayn jiray Macnaha Quraan-tan iyo hadda-si af ah Quruumo badan, Xalqada Masaajidka iyo Meelo kalaba, taasoo reebtay Raad Fiican, sababna u noqotay sugnaanta Gomadda Islaamku Gobalkan Geeska.

Waxna uma dhexeeyo ku Caddaynta Quraanka odhaah ama Qoraal, inkastoon Rumaysanahay Waajibnimada Barashada Luuqada Quraanka "Carabiga" sidoo kale ku barashada Macnaha Quraanka wayn si kasto oo khayra oo wanaagsan, ma waxaa roon in layska fadhisto oo wax uun la sugo camal la'aan, mise in Dadaal lagu dhiibo u adeegidda Quraanka Sharafta leh.? Haddaan eegno habka Kitaabka waxaad ogtahay inaan Kitaabka Quraanka ah Dhammaantiis lagu fasin hadda ka hor -intaan ogahay- Luuqada Soomaaliga ah, iyadoo Luuqaduna ku jirto waqti korid. Arrinta Labaad waxaa jira Xuruuf Qaarkeed aan laga helayn Luuqada Soomaaliga ah sida: «ث» waxaana baddelkeeda qaatay Xarafka "TH" iyo Xarafka «ز» Oon beddelkeeda qaatay Xarafka "Z" sida badan, kuwo kalana waa laga yaabaa.

Waxaana ku qorray Naska Quraanka Luuqada Carabiga ah iyadooy Aayad walba

wadato Raqamkeedii taasoo ka yeeli Ruuxu inuu u Akhriyo sida Kitaab Jaamac ah, waxaana ka soo horjeeda Macnihii Quraanka oo Luuqada Soomaaliga ah, hasayeeshee Raqamku Aayadaha Dhammaadkooda yuu iman, Macnahana Bilowga.

Kuma Dhibin Naftayda inaan u Turjumo Quraanka si Xarfi ah, waxaanse isku dayey inaan u Caddeeyo Macnihiisa si Kooban, waana kala duwanyihiin Labada Arrimood sidaan Citiqaadin, illeen tan dambe waa uun fasiraad kaliyee.

Arrinta kale ma doonin Lahjad gaara oo Soomaali ah, waxaanse ku dadaalay Soomaaliga Guud, haddana laga yaabo in Dadka Qaarkii wax u Muuqdo. Tarjamo kasta waxaan u dambaysiiyey Sharax kooban oo kulmin Macnaha Aayadaha isku xidhan, mararka qaarkoodna waxaannu soo Aroorinaa Xadiithka Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ama hadal Asaxaabi, ama hadal mid ka mida Culimadii Islaamka ee la Yaqiinay, ama ku baraarujin xukun ama Xigmad, ama Caddayn Sababta Suuraddu ku soo Degtay, ama Aayaddu, waxaa soo Dhanna waa si kooban, illeen hadal ma Dhammaado inta Dadku ka dhammaan. Ujeedadeenuna waa in la fahmo Dhinac ka mida Macnaha Quraanka Cad, mase aha in wax walba la sheego, hadalka badanna waxbuu dhibaa markuu xadda ka baxo. Inkastoon isku daynay inaan soo dhawayno Macnaha Quraanka Dadaalna aan ku Dhiibnay intaan karro oo u noqonnay Kutubo badan Muddo Shan Sano dhexdeeda oon ku Shuqloonayn Arrintan, lana Noolayn Quraanka, haddana waxaa dhici kara gaf, waxaanse ka baryeynaa Eebaha Gargaara ee kara ee Naxariista ee Saamaxaadda badan inuu naga dhaafo wixii naga dhaca oo Simbiriirixo ah, naguna Arzuqo Niyad Fiican iyo Camal Wanaagsan, oo la Aqbaloo Eebe waa dhawe Ducada Ajiibee.

Fadliga Kitaabka Ilaahay ee Quraanka ah ee Wayn, iyo Fadliga isku Shuqlintiisa: Barasho, Ogaansho, Xifdid, Akhrin, Barid, Fasiraad, Raaciddiisa iyo ku Camal falkiisu waa Arrin aan ciddii baran ka qarsoonayn. Waxaana wax kaga Ishaarray Qoraalkanaga lagu Magacaabo "Culuunta Furqaan".

Ugu dambayn waxaan Ilaaheenna wayn ee Naxariista ka baryeynaa Dambi Dhaaf Anaga iyo Waalidiintanno, Muslimiinta oo Dhan iyo cid kasta oo Gacan Khayr ka gaysata Kitaabka iyo Cid kasta oo ka Faa'iidayata Kitaabkan oo Mu'miniinta ka mida. Eebe isaga Gargaare Fiican ehe.

Waxay Dhammaatay Qoriddii Kitaabkan:

7/11/Sanadkii 1405 H.

Maxamud Maxamed Cabdi.

سُورَةُ الرَّحْمٰنِ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ ١
الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ٢
الرَّحْمٰنِ الرَّحِيمِ ٣ مَلِكِ يَوْمِ الدِّينِ ٤
إِيَّاكَ نَعْبُدُ وَإِيَّاكَ نَسْتَعِينُ ٥ أَهْدِنَا
الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِيمَ ٦ صِرَاطَ الَّذِينَ أَنْعَمْتَ
عَلَيْهِمْ غَيْرِ الْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ
وَلَا الضَّالِّينَ ٧

سُورَةُ النَّازِعَاتِ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الرَّ ١ ذَٰلِكَ الْكِتَابُ لَا رَيْبَ فِيهِ هُدًى

لِّلْمُتَّقِينَ ٢ الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِالْغَيْبِ وَيُقِيمُونَ الصَّلَاةَ

وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ ٣ وَالَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِمَا أُنزِلَ

إِلَيْكَ وَمَا أُنزِلَ مِنْ قَبْلِكَ وَبِالْآخِرَةِ هُمْ يُوقِنُونَ ٤

أُولَٰئِكَ عَلَىٰ هُدًى مِنْ رَبِّهِمْ وَأُولَٰئِكَ

هُمُ الْمُفْلِحُونَ ٥

Suurat Al - Faatixah

سورة الفاتحة

1. Magaca Eebe yaan ku billaa-baynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.
2. Mahad Eebaa iska leh ee bar-baariyaha Caalamka ah (Koonka).
3. Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.
4. Ee hanta maalinta abaalmarinta (Qiyaamada).
5. adiga unbaan ku caabudaynaa, adiga unbaana kaa kaalmo way-diisanaynaa (Eebow).
6. ee nagu hanuuni jidka toosan (Xaqa).
7. Jidka kuwii aad unicmaysay edaan u cadhoonin dhuminna.

Suuradani waa suurad wayn, Kitaabka Ilaahayna Ka billowdo Salaadana in lagu akhriyo ay waajibtahay.

kulmisatayna Ammaanta Eebe, Mahadiisa , Qiyaamada, Cibaadada Eebe iyo Kaalmo waydiisigiisa iyo Inuu Ku toosiyo Jidka toosan ee xaqa ah, Jidkaasoo ah Kay qaadeen Dadkii Fiic fiicnaa ee Eebe unicmeeyey oo ahaa Nabiyadii, Rumeeyayaashii, Shuhadadii iyo Kuwii suubanaaba ee Ka leexday Wadada Kuwii loo cadhooday ee yuhuudda ahaa iyo kuwii dhumay ee nasaarada ahaa.

waxaana lagu magacaabaa Suuradan magacyo Badan oy ka midtahay Hooyada Quraanka Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korriisa hayeelee)

Wuxuu yidhi: Amarkastoon lagu bilaabin Bisinka waa Naaqus.

Sidoo kale wuxuu yidhi: Salaadu uma jirto Ruuxaan akhriyin Faataxada.

Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

Fadligeedana halkan kuma soo koobi karno waxaase fiican in la fahmo waxay kulmisatay laguna dhaqmo, Eebana dhab loo caabudo dhabna looga kaalmo waydiisto, had iyo jeerna la digtoonaa hanaan iyo toosnaanna Eebe la warsado iyo inuu kaa duwo jidka xun ey qaadeen xaqqiidayashu iyo gaalada dhamaanteed.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korriisa ha yeelee). wuxuu yidhi: Dhugbadane waa ruuxa naftiisa xisaabiya una camal fala Geeri dabadeed.

Waxaa wariyey Imaam Axmed iyo kuwo kale. Al - Faatixah (1- 7)

Suurat Al- Baqarah

سُورَةُ الْبَقَرَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabay-naa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

1. Aad baa Macnaheeda looga hadlay, waxaana la sheegay inay magaca suuradda tahay, ama ay ku tusin Mucjisadda Quraanka, Eebe unbaa oga waa la dhahaa.

2. Kitaabkaas (Quraanka) shaki kuma jiro Hanuunbaana ugu sugan kuwa dhawrsada.

3. ee ah kuwa rumeeya waxaan la arkayn (ee xaq ah) oogana Salaad-da, waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya.

4. ee ah kuwa rumeeya waxa lagugu dajiyey Nabiyou, iyo wixii la dajiyey horay, Aakhirana yaqiin.

5. kuwaasi hanuun Eebe yey ku suganyihiin kuwaasina waa uun kuwa liibanay.

Suuraddan waa Suuradda u dheer Quraanka waxayna kulmisatay waxyaalo badan oo ah: Xukumo, Qisooyin, iyo Wanaagyo badan, waxayna ku bilaabatay xaqnimada Quraanka iyo siduu hanuun ugu yahay kuwa xumaanta ka dhawrsada, ee rumeeya xaqayna arkayn sida Eebeheen, Malaa'igta, Qiyaamada, Jannada iyo Naarta iyo wax kastoo xaq ah, Eebena Ka Yaaba hadday cid la joogaan iyo haddii kaleba, Salaadana ooga, Sakada iyo sadaqadana bixiya, Quraanka iyo Kutubtii horana rumeeya 'kuwaasina waa kuwa hanuunay ee liibanay. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha Yeelee wuxuu yidhi: Haka yeelina Guryihiinna Qubuuro, illeen Gurigii lagu akhriyo Suuradda Baqarah ma galo shaydaane. Waxaa wariyey Imaam Muslim iyo Axmed iyo Kuwo Kale. Xasan Basri wuxuu yidhi: Dhawrsade waa kan iska ilaaliya waxa laga reebay, Gutana waxa lagu faralyeelay. Al - Baqarah (1- 5)

6. Kuwii Gaalobay waxaa isugumid ah udigtayaa iyo umaadan diginaa mana rumeeyaan (xaqa).

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا سَوَاءٌ عَلَيْهِمْ ءَأَنذَرْتَهُمْ أَمْ لَمْ تُنذِرْهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٦﴾

7. Eebaa daabacay Quluubtooda iyo Maqalkooda. aragoodana wuxuu yeeley Dabool waxaana u sugnaaday Cadaab weyn.

خَتَرَ اللَّهُ عَلَى قُلُوبِهِمْ وَعَلَى سَمْعِهِمْ وَعَلَى أَبْصَارِهِمْ غِشْوَةً وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٧﴾

8. Dadka waxaa ka mid ah kuwo dhihi waxaan rumeynay Eebe iyo maalintii dambaysay (Qiyaamada) haddana aan Mu'miniin ahayn.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يَقُولُ ءَامَنَّا بِاللَّهِ وَيَأْتُونَ الْآخِرَةَ وَمَاهُمْ بِمُؤْمِنِينَ ﴿٨﴾

9. waxay khiyaameyn Eebe iyo kuwa (Xaqa) rumeeyey mase khiyaamaynayaan waxaan naftooda ahayn mase kasayaan.

يُخَادِعُونَ اللَّهَ وَالَّذِينَ ءَامَنُوا وَمَا يُخَادِعُونَ اللَّهَ أَنفُسُهُمْ وَمَا يَشْعُرُونَ ﴿٩﴾

10. Quluubtay ka bukaan markaasaa Eebe u siyaadiyay Cuduro waxayna mudan Cadaab daran Beentoodii Dar-teed.

فِي قُلُوبِهِمْ مَّرَضٌ فَزَادَهُمُ اللَّهُ مَرَضًا وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ۖ إِنَّ كَذُوبَتُمْ ﴿١٠﴾

11. Marka lagu dhoho ha fasaadini-na dhulka waxay dhahaan annagu waxaan uun nahay Hagaajiyayaal.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ لَا تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ قَالُوا إِنَّمَا نَحْنُ مُصْلِحُونَ ﴿١١﴾

12. iyaga unbaa fasaadiyayaal ah hasa yeeshee ma kasayaan.

أَلَا إِنَّهُمْ هُمُ الْمُفْسِدُونَ وَلَكِن لَّا يَشْعُرُونَ ﴿١٢﴾

Surraddu waxay xagga hore kaga hadashay Mu'miniinta iyo xaqa ku suganyihiin, haddana waxay ka hadashay Gaalada iyo sida loo daboolay Qalbigooda, Maqalkooda iyo Indhahoodaba iyo in xumaan u sugnaatay. Mar saddexaadna waxay ka hadashay Munaafiqiinta iyo warkooda beenta ah iyo siday isugudayayeen inay Eebe iyo Mu'miniinta khayaameeyaan, iyadod dhabtu tahay inay naftooda khiyaamayn'Qalbigana ka bukaan una sii kordhi, marka xumaanta laga reebana ey sheegtaan inay wax wanaajin, dhab ahaanna iyaga unbaa xumaan wadayaal ah mase oga. Basuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Waxaa lay faray inaan la dagaalamo Dadka intay ka dhahaan macbuud xaq lugu caabudaa ma jiro Allaah mooyee, hadday dhahaanna way iga ilaaliyeen dhiiggooda iyo Xoolahoodaba waxaan xaqeeda ahayn Xisaabtooduna Eebaa leh waynaaeye. Waxaa wariyay Labadii Sheekh (Bukhaari iyo Muslim). Al - Baqarah (6 - 12)

13. marka lagu dhoho rumeeya sida Dadku u rumeeyey waxay dhihi mawaxaannu u rumayn sida sufahada (Caqli gaabka), waxaase sufaha ah iyaga uun laakiin ma oga.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ ءَامِنُوا كَمَا ءَامَنَ النَّاسُ قَالُوا أَنُؤْمِنُ كَمَا ءَامَنَ السُّفَهَاءُ ؕ أَلَا إِنَّهُمْ هُمُ السُّفَهَاءُ وَلَا يَشْعُرُونَ ﴿١٣﴾

14. markay la Kulmaan Kuwa ru-meeyey (Xaqa) waxay dhihi waan ru-maynay, markay la kaliyoobaan shaydaamadoodana waxay dhahaan annagu waan idinla Jirraa, ee waxaan ahayn uun kuwa ku jees jeesa (Mu'miiniinta)

وَإِذْ الْقَوْمَ الَّذِينَ آمَنُوا قَالُوا آمَنَّا وَإِذَا خَلَوْا إِلَىٰ شَيْطَانِهِمْ قَالُوا إِنَّا مَعَكُمْ إِنَّمَا نَحْنُ مُسْتَهْزَؤُونَ ﴿١٤﴾

15. Allaa ku jeesjeesi iyaga (si xaq ah oo booskeedi dhacday) wuxuuna u siyaadin kibirkooda iyo Baadidooda, iyagoo ku dhexwareeri.

اللَّهُ يَسْتَهْزِئُ بِهِمْ وَيَمُدُّهُمْ فِي طُغْيَانِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿١٥﴾

16. kuwaasi waxay ku gateen baadida hanuunka, mana ribxin (faa'iidin) ganacsigoodu mana hanuunsana.

أُولَٰئِكَ الَّذِينَ اسْتَرَوْا الصَّلَاةَ بِالْهَدْيِ فَمَارَحَتْ بِتَحْرِيمِهِمْ وَمَا كَانُوا مُهْتَدِينَ ﴿١٦﴾

17. waxay la mid yihiin mid huriyey Dab, markuu iftiimiyay gaararkoodana yaa Eebe la tagay Nuurkoodii ugagana tagay Mugdi ayan wax arkayn.

مَثَلُهُمْ كَمَثَلِ الَّذِي اسْتَوْقَدَ نَارًا فَلَمَّا أَضَاءَتْ مَا حَوْلَهُ ذَهَبَ اللَّهُ بِنُورِهِمْ وَتَرَكَهُمْ فِي ظُلُمٍ لَّيَٰبِسُونَ ﴿١٧﴾

Xumaanlow iyo Munaafiq marka la waaniyo oo wanaaga la faro wuxuu ku jawaabaa xumaam iyo madax adayg isagoo dhihi ma waxaan wax u rumayn siday Mu'miniinta caqliga yar wax u rumeyeen, dhabtuse waa in isagu caqli gaabiyahay, Shayaadiinta ay wax isku qastaanna wax u tarayen ee xumaan uun u siyaadi"waana kuwo wanaaga nacay oo baadi doortay" kuna khasaaray ganacsigii nuurkii iyo Iftiinkiina ka fogaada oo mugdi, iyo qas ku dhex dabaalan. Ibnu Cabaas iyo Mujaahid waxay sheegeen in shaydaamadoodu yihiin Gaalada hogaamisa ee Yuhuud iyo Musahrikiin ah. Al - Baqarah (13 - 17).

18. waa Dhaga la'aan, Hadala'aan, aragla'aan, xaqana uma soo noqdaan.

صُمٌّ بُكْمٌ عُمَىٰ فَهُمْ لَا يَرْجِعُونَ ﴿١٨﴾

19. wuxuu la midyahay xaalkoodu sidii Roob Samada Ka soo degay oo Mugdiyo onkod iyo Hillaac leh, oy gelinayaan Farahooda Dhagahooda hanqadhka (Danabka) owgiis geeri ka digtooni darteed, Eebana waa koobay Gaalo.

أَوْ كَصَيْبٍ مِنَ السَّمَاءِ فِيهِ ظُلُمٌ وَرَعْدٌ وَنُقُرُوقٌ يَجْعَلُونَ أُصْبُعَهُمْ فِي آذَانِهِمْ مِنَ الصَّوَعِ حَذْرَ الْمَوْتِ وَاللَّهُ يَحِيطُ بِالْكَافِرِينَ ﴿١٩﴾

20. wuxuu u dhawyahay hillaacu (xaqu) inuu dafo aragooda, markastoos u ifo way ku socdaan, markuu ku mugdiyoobana wuxuu la tagaa Maqalkooda iyo Aragooda Eebana wax walba waa karaa.

يَكَادُ الْبَرْقُ يَخْطَفُ أَبْصَارَهُمْ كُلَّمَا أَضَاءَتْ لَهُمْ مَشْوَاهِمْ وَإِذَا أُظْلِمَ عَلَيْهِمْ قَامُوا وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَذَهَبَ بِسَمْعِهِمْ وَأَبْصَارِهِمْ إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٠﴾

21. Dadow caabuda Eebihiinna idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyey, waxaadna mudataan inaad dhowrsataan

يَأْتِيهَا النَّاسُ أَعْبُدُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ وَالَّذِينَ
مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١١﴾

22. Eebaha Dhulka idiin ka yeelay Gogol, Samadana dhismo, idiinkana-soo dajiyey Samada Biyo, kuna soo bixiyey Midho si laydiinku arzuqo ee ha u yeelina Eebe kuwa la mid ah idinkoo og.

الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ فِرَاشًا وَالسَّمَاءَ بِنَاءً وَأَنْزَلَ
مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجَ بِهِ مِنْ الثَّمَرَاتِ رِزْقًا
لَّكُمْ فَلَا تَجْعَلُوا لِلَّهِ أَنْدَادًا وَأَنْتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١٢﴾

Eebe wyuxuu sheegay in gaaladu xaqa ka Maqal, aragiyo afla'dahay oy lamid yihiin cid roob hanqadh iyo hillaac badan ku da'aayo waqti mugdi ah oo cabsi iyo argagax ku sugan, taasina waxay tusaale u tahay siday u wareersan tahay Galladu oy xaqa uga sii jeeddo, waxaase ku haboon Dadka inay caabudaan Eebaha u nicmeeyey wax walbana abuurary. Al- Baqarah (18- 22)

23. haddaad shakisantihiin waxaan ku dejinay addoonkana (Nabiga) keena Suurad la mid ah, una yeedha markhaaitiyadiin (kaalmeeyayaashiinna) ee Eebe ka soo hadhay haddaad runlowtihiin.

وَإِنْ كُنْتُمْ فِي رَيْبٍ مِمَّا نَزَّلْنَا عَلَىٰ عَبْدِنَا فَأْتُوا
بِسُورَةٍ مِّن قَبْلِهِ ۚ وَادْعُوا شُهَدَاءَكُمْ مِمَّن دُونِ
اللَّهِ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿١٣﴾

24. haddaydaan falin mana falaysaane ka dhawrsada Naar lagu shido Dadka iyo Dhagaxa, loona darbay gaalada.

فَإِنْ لَّمْ تَفْعَلُوا وَلَنْ تَفْعَلُوا فَاتَّقُوا النَّارَ الَّتِي وَقُودُهَا
النَّاسُ وَالْحِجَارَةُ ۖ أُعِدَّتْ لِلْكَافِرِينَ ﴿١٤﴾

25. ugu bishaaree kuwa rumeeyey (xaqa) Camal fiicanna Falay inay mudan Janooyin ay socoto dhexdeeda Wabiyaalkii, markastoo laga arzaaqa xaggeeda midho waxay dhahaan kani waa kii horay naloogu arzuqay, waxaa la siiyey isagoo isu eg (araga) waxayna dhexdeeda ku leyihiin Haween (Janno) oo nadiif ah, dhexdeedana way ku waari.

وَيَسِّرَ الْيُسْرَىٰ وَأَمْسُوا وَعَمَلُوا الصَّالِحَاتِ ۚ أَنْ لَّهُمْ
جَنَّاتٌ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ۖ كُلَّمَا رُزِقُوا
مِنْهَا مِنْ ثَمَرٍ رِزْقًا قَالُوا هَذَا الَّذِي رُزِقْنَا مِنْ
قَبْلُ وَأَنْتُمْ بِهَا مُتَشَبِهُونَ ۚ وَلَهُمْ فِيهَا أَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ
وَهُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿١٥﴾

Kitaabka Quraanka ah waa Kitaab wayn oo wanaagu ku dhanyahay, Xugun, amar, reebid, Akhlaaq, Qisas, Tusaale iyo wax kastoo loobaahanyahay. saas darteed yaa Eebe cajiis galiyey Gaalada inay layimaadaan wax la mid ah Quraanka, cidday rabaanna la kashadaan, marhaddayse ka noogeen oyna weligoodna keeni karin ha ka dhowrsadeen naftooda naar daran oo gaal loo darbay, muumiiniinta xaqqa rumeeyey ee wanaagga fashayna waxay mudan Janooyin wanaag ku dhanyahay oo wanaageeda iyo Midhaheedu isu egiyihiin xagga aragga.

Ibnu Maseuud waxaa laga wariyey inuu yidhi: Haddaad Maqashaan Eebe oo ku leh Quraanka kuwa xaqa rumeeyow aad u dhagaysta waa khayr uu fari ama shar uu reebi. Al - Baqarah (23 - 25)

26. Eebe kama xishoodo (reebtoonaa-do) inuu tusaale u yeelo kaneece iyo waxkasareeyaba, kuwa (xaqa) rumeeyeyse waxay ogyihiin inuu xaqyahay (Quraanku) kana yimid xagga Eebahood kuwa gaaloobayse waxay dhihi muxuu Eebe ula jeedaa tusaalahan, wuxuu ku dhumin Eebe in badan wuxuuna ku hanuunin in badan waxaan faasiqiin ahayna kuma dhumiyi.

* إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْفَاسِقِينَ ۝ أَنْ يَضْرِبَ مَثَلًا مَّا بَعْضُهُمْ فَعَمَّوْهُمَا فَآمَنُوا بِالَّذِينَ آمَنُوا فَيَعْلَمُونَ أَنَّهُ الْحَقُّ مِنْ رَبِّهِمْ وَأَمَّا الَّذِينَ كَفَرُوا فَيَقُولُونَ مَاذَا أَرَادَ اللَّهُ بِهَذَا مَثَلًا يُضِلُّ بِهِ كَثِيرًا وَيَهْدِي بِهِ كَثِيرًا وَمَا يُضِلُّ بِهِ إِلَّا الْفَاسِقِينَ ﴿٢٦﴾

27. ee ah kuwa buriya ballanka Eebe intay adkeeyeen ka dib, oo gooya wuxuu faray Eebe in la xidhiidhiyo oo fasaadiya Dhulka kuwaasu waa kuwa khasaaray.

الَّذِينَ يَتَّقُونَ عَهْدَ اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مِيثَاقِهِ وَيَقْطَعُونَ مَا أَمَرَ اللَّهُ بِهِ أَنْ يُوصَلَ وَيُفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ أُولَئِكَ هُمُ الْخَاسِرُونَ ﴿٢٧﴾

28. seed uga gaaloobaysaan Eebe idinkoo ahaa waxaan noolayn, markaas Eebe idin nooleeyey haddana idin dili haddana idin soo noolayn ka dibna xaggiisa laydiin celin.

كَيْفَ تَكْفُرُونَ بِاللَّهِ وَكُنْتُمْ أَهْلًا لَهَا قَاتِلِكُمْ ثُمَّ يُعْيِيكُمْ ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٢٨﴾

Markay Gaaladii dheheen maxaa looga jeedaa Caarada iyo daqsiga lagu sheegay Quraanka yaa Alle soo dajiyey aayaddan "Eebana xaqa cadayntiisa waxba uma daayo Mu 'minkase wax walboo xaqa wuu rumeeyaa waxaase ku dhumi faasiqiinta ballankana buriya' gooyana wixii Eebe faray in la xidhiidhiyo dhulkana fasaadin, waana kuwa khasaaray' mana haboona in laga gaaloobo Eebaha wax dila waxna nooleeya xaggiisana loo noqon. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Wixii khasaara ah oo Eebe ku sheego waxaan islaamka ahayn waa gaalnimo, wixii Khasaara ah oos kusheego Dadka Islaamkana waa dambi. Al - Baqarah (26 - 28).

29. Eebe waa kan idiin abuuray waxa dhulka ku sugan dhamaan, markaas Samada u kor noqday kana dhigay Todobo Samo, Eebe wax walbana waa ogyahay.

هُوَ الَّذِي خَلَقَ لَكُمْ مَّا فِي الْأَرْضِ جَمِيعًا ثُمَّ اسْتَوَىٰ إِلَى السَّمَاءِ فَسَوَّاهُنَّ سَبْعَ سَمَاوَاتٍ وَهُوَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٢٩﴾

30. xus markuu ku yidhi eebahaa Malaa'igta waxaan yeeli Dhulka cid u hadha, oyna dheheen ma waxaad yeeli dhexdeeda cid fasaadisa oo kudaadisa

وَأَذَانًا لِّرَبِّكَ لِلْمَلَائِكَةِ أِذَا جَاءَ فِي الْأَرْضِ خَلِيفَةً قَالُوا أَتَجْعَلُ فِيهَا مَن يُفْسِدُ فِيهَا وَيَسْفِكُ

dhiig annagoo ku nasahayna mahadaada darteed oo ku wayneynayna markaasuu yidhi anigu waxaan ogahay waxaydaan ogayn.

الذِّمَّةَ وَنَحْنُ مُسِيحٌ بِحِمْدِكَ وَنُقَدِّسُ لَكَ قَالَ
إِنِّي أَعْلَمُ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٣١﴾

31. Eebe wuxuu baray Nabi Aadam magacyada dhammaan, markaasuu u bandhigay Eebe malaa' igta kuna yidhi' iiga warama magacyada kuwaas hadaad runlowtihiin.

وَعَلَّمَ آدَمَ الْأَسْمَاءَ كُلَّهَا ثُمَّ عَرَضَهُمْ عَلَى
الْمَلَائِكَةِ فَقَالَ أَنْبِئُونِي بِأَسْمَاءِ هَؤُلَاءِ إِنْ
كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٣١﴾

32. waxayna dheheen nasahnidaada Eebow, cilmi malihin waxaad na barto mooyee waxaad tahay adigu wax oge falsan.

قَالُوا سُبْحَانَكَ لَا عِلْمَ لَنَا إِلَّا بِمَا عَلَّمْتَنَا إِنَّكَ أَنْتَ الْعَلِيمُ
الْحَكِيمُ ﴿٣٢﴾

33. wuxuuna yidhi Eebe Aadamow uga warran Magacyadooda, markuu magacyadooda uga warramay yuu yidhi Eebe miyaanan idin ku dhihin anigu waxaan ogahay waxa ku maqan Samooyinka iyo dhulka, iyo inaan ogahay waxaad muujinaysaan iyo waxaad qaransaysaan.

قَالَ يَا آدَمُ أَنْبِئْهُمْ بِأَسْمَائِهِمْ فَلَمَّا أَنْبَأَهُمْ
بِأَسْمَائِهِمْ قَالَ أَلَمْ أَقُلْ لَكُمْ إِنِّي أَعْلَمُ غَيْبِ
السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَأَعْلَمُ مَا تُبْدُونَ وَمَا كُنْتُمْ
تَكْتُمُونَ ﴿٣٣﴾

Dhulka waxa ku sugan Eebe wuxuu u abuuray dadka, waana inay ku mahdiyaan sifcanna ugu dulnoolaadaan dhulka' Eebe waa kan intixamay Malaa'igta una sheegay inuu dhulka yeeli cid dagta oo khalif ka noqota, markay la yaabeen oo sheegeen inay ka yaabi inay dhulka fashaadiyaan yaa Eebe Nabi Aadam abuuray oo faray inuu sheego wax Malaa'igta garanweyday oo magacyo ah, taasna waxay ku tusin in Eebe uun wax walba ogyahay wax qarsoon, wax muuqda iyo wax lamuujiyaba. Al - Baqarah (29 - 33).

34. xus markaan ku nidhi Malaa'igay u sujuuda Adam, markaasay sujuudeen Iblis mooyee, wuu diiday wuuna iskibriyay, waxuuna ka midnoqday gaalada.

وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ
أَبَىٰ وَاسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ ﴿٣٤﴾

35. waxaana nidhi Aadamow dag adiga iyo Haweenaydaadu janada, kana cuna xageeda (cunno) shifo oo wasac ah meeshaad doontaan hana u dhawaani-na geeddan oo markaas aad kamid noqotaan daaliminta.

وَقُلْنَا يَا آدَمُ اسْكُنْ أَنْتَ وَزَوْجُكَ الْجَنَّةَ وَكُلَا مِنْهَا
رَغَدًا حَيْثُ شِئْتُمَا وَلَا تَقْرَبَا هَذِهِ الشَّجَرَةَ
فَتَكُونَا مِنَ الظَّالِمِينَ ﴿٣٥﴾

36. Waxaana ka fogeeyey Jannada

فَأَزَلَّهُمَا الشَّيْطَانُ عَنْهَا فَأَخْرَجَهُمَا مِمَّا كَانَا فِيهِ وَقُلْنَا

xaggeeda shaydaan wuxuuna ka bixiyey waxay ku sugnaayeen, waxaana ku nidhi ka hoobta Jannada, qaarkiinna qaarka kale iyadoo col uu u yahay, waxaana dhulka idiinku sugnaaday meel aad ku nagaataan iyo raaxo tan iyo waqti.

أَهْطُوا بُعْضَكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ وَلَكُمْ فِي الْأَرْضِ
مُسْتَقَرٌّ وَمَتَاعٌ إِلَى الْحِينِ ﴿٣٦﴾

37. waxuuna kala kulmay Adam xaga Eebe kalimooyin, wuuna ka toobad aqbalay, Allana Waa toobad aqbal badane waana naxariiste.

فَتَلَقْنَا آدَمَ مِنْ رَبِّهِ كَلِمَتٍ فَتَابَ عَلَيْهِ إِنَّهُ
هُوَ التَّوَّابُ الرَّحِيمُ ﴿٣٧﴾

Aayadahan waxay ka warrami sida Eebe u sharrifay Nabi Adam iyo caruurtiisa, Malaa'igtana u faray inay u sujuudaan'hase yeeshee Iblisbaa diiday'isna kibriyey, gaaloobayna, Nabi Adamna wuxuu ku noolaa jannada isaga iyo haweenaydiisii intuu Iblis ka waswaasiyo geediina cunaan, markaas Eebe ka saaray jannada, isagooy ku noolaan dhulka iyagoo col isu ah. Eebe waa ka toobad aqbalay Adam markuu u toobadkeeday. taasina waxay muujin xumaanta Iblis iyo inay waajib tahay in xumaanloo dhan laga digtoonaado, lagana fogaado isaga iyo xumaantiisa. Al - Baqarah (34 - 37).

38. waxaan ku nidhi ka hoobta xaggeeda dhamaantiin, hadduu idiinka yimaaddo xaggayga hanuun ruuxii raaca hanuunka cabsi korkiisa ma ahaato iyo murug midna.

فَلَمَّا أَهْطُوا مِنْهَا جَمِيعًا فِيمَا يَأْتِيَنَّكُمْ مِنِّي هُدًى
فَمَنْ تَبِعَ هُدَايَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ
يَحْزَنُونَ ﴿٣٨﴾

39. kuwa gaaloobayse oo beeniyeey aayaadkanaga, kuwaasu waa ehelu naar dhexdeedana way ku waari.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا أُولَٰئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ
هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٣٩﴾

40. Bini Israa'iilow xusa nicmadayda aan idiinku nicmeeyey, oofiyan ballankaygii aan oofiyo ballankiinna, aniga unna igacabsada.

يَسْبِي إِسْرَائِيلَ أَذْكَرُوا نَعْتِي الْبِئْسَ الْأَعْمَتُ عَلَيْكُمْ
وَأَوْفُوا بِعَهْدِي أَوْفِ بِعَهْدِكُمْ وَإِنِّي فَأَرْحَمُ الرَّحِيمِينَ ﴿٤٠﴾

41. rumeeyana waxaan dejiyey isagoo rumayn waxaad haysataan, hana noqonina mid ka gaaloobay quraanka kii ugu horreeyay, hana ku gadanina aayaadkayga qiimo yar (aduunka) aniga uun iga dhawrsada.

وَمَا آمَنُوا بِمَا أَنزَلْنَا مُصَدِّقًا لِمَا مَعَكُمْ وَلَا تَكُونُوا أُولَٰئِكَ
كَأَفْرِهِمْ بِهِمْ وَلَا تَشْتَرُوا بِآيَاتِي ثَمَنًا قَلِيلًا وَإِنِّي
فَأَتَقُونِ ﴿٤١﴾

42. hana ku khaldina xaqa baadilka, ood qarisaan xaqa idinkoo og.

وَلَا تَلْبِسُوا الْحَقَّ بِالْبَاطِلِ وَكَفَرُوا بِالْحَقِّ وَأَنَّهُ
تَعَالَمُونَ ﴿٤٢﴾

43. ooga salaadda, bixiyana sakada, lana rukuuca kuwa rukuuca (tukada).

وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَارْكَعُوا
مَعَ الرَّاكِعِينَ ﴿٤٣﴾

aayadahan waxay sheegi in dadka markuu u yimaaddo hanuun iyo Nabiyo ruuxii raaca uusan cabsi iyo murug midna arkayn, ciddii ka gaalowdana oo beenisa aayaadka Eebe uu kuwaari naarta. Aayadaha kalena waxay ka qisoona reer binii israa'iil iyo siduu ballan adag uga qaaday una nicmeeyey ayna waajib tahay inay ka cabsadaan, iyo inay rumeeyaan xaqa Eebe soo dajiyey'ayna noqonin quraanka kuwa ugu horreeya ee ka gaaloobo, xaqana ayna ku gadanin wax yar'xaqa iyo baadikana ayan isku khalidin'xaqoyna qariniin iyagoo og. Salaadda iyo sakadana gutaan'lana tukadaan mu'miniinta tukan. Rasuulkuna wuxuu yidhi: (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) Ruuxii cilmi in dar Eebe loo barto ahayd u barta uun adduunyo kuhel ma uriyo uduga janada. Waxaa wariyey Abudaaud. Al-Baqarah (38-43).

44. ma waxaad faraysaan dadka wanaaga ood halmaansantihiiin naftiina idinkoo akhrin Kitaabka miyeydaan wax kasayn.

* أَأَمْرُونَ النَّاسَ بِالْبِرِّ وَتَنسَوْنَ أَنْفُسَكُمْ وَأَنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ٤٤

45. kaalmaysta samirka iyo salaadda wayna ku wayn tahay salaaddu (ku culustahay) kuwa khushuuca mooyee.

وَأَسْعِفُوا بِالصَّبْرِ وَالصَّلَاةِ وَأَنْهَاكُمُ الْكِبْرِيَاءَ إِلَّا عَلَى الْخَاشِعِينَ ٤٥

46. kuwa citiqaadsan inay la kulmi Eebahood xagiisana loo celin.

الَّذِينَ يَظُنُّونَ أَنَّهْمُ مُلْقَوَاتُ بَهْمٍ وَأَنَّهْمُ إِلَهِهٖ رَاجِعُونَ ٤٦

47. Bini'israa'iilow xusa nicmadeydii aan idiinku nicmeeyey, iyo inaan idinka fadilay caalamkii (markaas).

بِنَبِيِّ إِسْرَائِيلَ ذَكَرُوا نِعْمَتِي الَّتِي أَنْعَمْتُ عَلَيْكُمْ وَأَنِّي فَضَّلْتُكُمْ عَلَى الْعَالَمِينَ ٤٧

48. kana dhawrsada maalin aanay nafi ka deeqeyn naf (kale) waxba, aan lagana aqbalayn shafeeco lagana qaadayn (ogalayn) furasho loona gargaarayn.

وَأَتَقُوا يَوْمَ لَا تَجْرَى نَفْسٌ عَنْ نَفْسٍ شَيْئًا وَلَا يُقْبَلُ مِنْهَا شَفَعَةٌ وَلَا يُؤْخَذُ مِنْهَا عَدْلٌ وَلَا هُمْ يُصْرُونَ ٤٨

49. xusa markaan idinka korinay fircoon iyo colkiisii ee idin dhadhansiin jiray cadaab daran, ayna gawrici jireen wiilashiina ayna dayn jireen gabdhihiina, taasina waxaa ku sugan imtixaam wayn oo Eebihiiin.

وَإِذْ نَجَّيْنَاكَ مِنَ آلِ فِرْعَوْنَ يَسُومُونَكَ وَسُوءَ الْعَذَابِ يَدْرِيحُونَ ۗ إِنَّمَا كُنَّ مَوَاسِيخٌ لِّسَاءِ مَا كُرَّهْتُمْ وَفِي ذَلِكَ لَعِبَاطٌ لِّمَنْ رَبِّكُمْ عَظِيمٌ ٤٩

50. xusa markaan idiin dhanballay badda oon idin korinay oona maanshaynay fircoon iyo colkiisii idinkoo eegaya.

وَإِذْ قَرَّبْنَا بَكَرَاتٍ فِي الْبَحْرِ فَأَمَّجَتْكُمْ وَأَغْرَقْنَا آلَ فِرْعَوْنَ وَأَنْتُمْ تَنْظُرُونَ ٥٠

Aayadda hore wuxuu Eebe ku cadeeyay ehelu Kitaabka taasoo uu u sheegay inayan haboonayn inay dadka wanaaga faraan naftoodana halmaansanyihiin iyagoo Kitaabka tawreed akhrin, ruux wax kasina uma haboona, markaasuu Eebe faray addoomadiisa inay kaalmaystaan samir iyo salaad, umana fududa salaaddu mu'miniinta mooyee, hadda rumaysan inay Eebe lakulmi una noqon. Waana in laga

dhawrsadaa dhibka maalinta qiyaame ee cidna cid kale wax u tarayn wax furasha ahna aan laga aqbalayn markaasaa Eebe u sheegay Bini israa'iil wuxuu ugu nicmeeyey iyo siduu uga nabadgaliyey fircoon iyo colkiisii. Dhabarani wuxuu yidhi: caalimka dadka khayrka fara oonse ku camal falayn wuxuu la mid yahay siraad isgubi. Al-Baqarah (44-50).

51. xusa markaan u yaboohnay (Nabi) muuse afartan habeen, markaas aad yeelateen dibi (aad caabudeen) gadaas-hiis idinkoo daalimiin ah.

وَإِذْ وَعَدْنَا مُوسَىٰ أَرْبَعِينَ لَيْلَةً ثُمَّ أَخَذْنَا الْعِجْلَ
مِنَ بَعْدِهِ ۗ وَأَنْتُمْ ظَالِمُونَ ﴿٥١﴾

52. markaas aan idin saamaxnay arrin-taas ka dib si aad u mahdisaan.

ثُمَّ عَفَوْنَا عَنكُم مِّن بَعْدِ ذَلِكَ لَعَلَّكُمْ
تَشْكُرُونَ ﴿٥٢﴾

53. xusa markaan siinay (Nabi) muuse kitaab iyo kala bixiye (xaqa iyo baadil-ka) si aad u hanuuntaan.

وَإِذْ آتَيْنَا مُوسَىٰ الْكِتَابَ وَالْفُرْقَانَ لَعَلَّكُمْ
تَهْتَدُونَ ﴿٥٣﴾

54. xusa markuu (Nabi) muuse ku yidhi qoonkiisa qoonkayow waxaad dulmi-deen naftiina yeelashadiinii dibiga (caabudo) ee u toobadkeena Eebihinna, dilana naftiina, saasaa idinku khayr badan Eebihii agtiis, markaasuu idin-ka toobad aqbalay maxaa yeelay Eebe waa toobad aqbal badane naxariista.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ ۖ يَقَوْمِ ۖ إِنَّكُمْ ظَلَمْتُمْ أَنفُسَكُمْ
بِاتِّخَاذِكُمُ الْعِجْلَ فَتُوبُوا إِلَىٰ بَارِيكُمْ فَاقْتُلُوا
أَنفُسَكُمْ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ عِنْدَ بَارِيكُمْ
فَتَابَ عَلَيْكُمْ إِنَّهُ هُوَ التَّوَّابُ الرَّحِيمُ ﴿٥٤﴾

55. xusa markaad dhahdeen muusow kuma rumaynayno intaan ka aragno Eebe si cadaan ah, markaasay idin qabatay qaylo ama naar idinkoo eegi.

وَإِذْ قُلْتُمْ يَا مُوسَىٰ لَنْ نُؤْمِنَ لَكَ حَتَّىٰ نَرَىٰ اللَّهَ
جَهْرَةً فَأَخَذَتْكُمُ الصَّلْبَةُ ۗ وَأَنْتُمْ تَنْظُرُونَ ﴿٥٥﴾

56. markaasaan idin soo bixinay geeri-diinii ka dib si aad u mahadisaan.

تَوَعَّظْتُمْ مِّن بَعْدِ مَوْتِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٥٦﴾

wuxuu eebe ku sheegay halkan nimcooyin badan oo uu ku manaystay, sida yaboohii tawreed iyo siismadii, saamaxadii, toobaadaqbalid, hase yeeshee waxay caabudeen dibi naftoodiina way dulmiyeen, waxayna sheegeen inayan xaqa rumeyneyn intay uga arkaan Eebe si cadaan ah, hase yeeshee waxaa lagu riday qaylo waana la soo bixiyeey intey dhinteen, taasina waxay ku tusin madax adeyga Bani'israa'iil iyo abaal kadarkooda. Al-Baqarah (51-56).

57. waxaan idinku hadhaynay Daruur, waxaan idinku soo dajinay macaan iyo hilib (shimbireed) waxaana idinku nidhi wax ka cuna wanaaggaan idiinku ar-zaaqnay, mana ayan na dulmin, laakiin

وَمَا ظَلَمْنَا عَلَيْكُمْ الْعَمَامَ وَأَنْزَلْنَا عَلَيْكُمُ الْمَنَّ
وَالسَّلْوَاطَ ۗ كَلِمَاتٍ طَيِّبَاتٍ مَّا رَدَّ قَوْلَكُمْ وَمَا
ظَلَمُونَا وَلَكِن كَانُوا أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٥٧﴾

waxay ahaayeen naftooda uun kuwa dulmiya.

58. Xusa markaan nidhi gala magaaladan oo kacuna xaggeeda Meejaad doontaan barwaaqa ah. Kana gala iridda idinkoo sujuudsan dhahana (Eebow) hoobi (danbi) aan idiin dhaafno gafafkiinee. Waxaan u siyaadinaynaa samafalayaasha (wanaag).

وَأَذَقْنَا أَدْخُلَهُمْ هَذِهِ الْقَرْيَةَ وَكُلُوا مِنْهَا حَيْثُ شِئْتُمْ رَغَدًا وَأَدْخَلُوا الْجَنَّةَ سُبْحَانًا وَقُولُوا حِطَّةٌ
تَغْفِرْ لَكُمْ خَطِيئَتَكُمْ وَسَارِعِدُ
الْمُحْسِنِينَ ﴿٥٨﴾

59. markaasay ku badaleen kuwii dulmi falay hadalkii loo yidhi mid aan ahayn, markaasaan kaga soo dajinay kuwii dulmiga falay Cadaab samada faasiqni-madoodii ay falayeen darteed.

فِيذَلِّ الَّذِينَ ظَلَمُوا قَوْلًا غَيْرَ الَّذِي قِيلَ لَهُمْ
فَأَنزَلْنَا عَلَى الَّذِينَ ظَلَمُوا رِجْزًا مِنَ السَّمَاءِ بِمَا
كَانُوا يَفْسُقُونَ ﴿٥٩﴾

60. Xusa markuu (Nabi) Muuse u roobdoonay qoomkiisa markaasaan ku nidhi ku garaac ushaada Dhagaxa, waxaana ka dillaacay xaggeeda Labo iyo toban ilood, wuuna ogaaday ruuxkasto (Koox kasta) meeshay ka cabbilahayd, waxaan ku nidhi ka cuna oo ka cabba rizqiga Eebe Dhulkana fasaad ha ku xumeynina.

﴿وَإِذْ أَسْتَسْقَىٰ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ فَقُلْنَا اضْرِبْ
بِعَصَاكَ الْحَجَرَ فَانفَجَرَتْ مِنْهُ اثْنَتَا عَشْرَةَ عَيْنًا
قَدْ عَلِمَ كُلُّ أُنَاسٍ مَّشْرِبَهُمْ كَوُلُوبُهُمْ وَأَسْرَأُوْنَ
رِزْقًا لِلَّهِ ۗ وَلَا تَعْتَوْنَ فِي الْأَرْضِ مَفْسِدِينَ ﴿٦٠﴾

Sidoo kale wuxuu Eebe ku mannaaystay Binii Israa'iil Nicmooyin kale sida hadhayn, macaan, Hilib xalaal ah iyo Rizqiga Eebe ee kale, wayse dulmifaleen ooy diideen wixii la faray, kuna badaleen wanaagii xumaan, markaasaa Eebe ciqaabay xumaantooda darteed (Nabi) Muusana waa kii u roobdoonay Eebana u dilaaciyeey Ilo Labiyo Toban ah si ay uga cabaan, wuxuuna faray inayan fasaadinin Dhulka, wuxuuna Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) sheegay in looyidhi Bani Isra'iil ka gala Albaabka oo dhaha dambi hoobin waxayse galeen iyagoo gurguuran oo dhihi: Xabbad ku jirta tin. Bukhaari yaa ka wariyey Abuuhureere. Al-Baqarah (57-60).

61. Xusa markaad dhaheen Muusow kuma samrayno cunno kaliya ee noo bari Eebaha ha noo soo bixiyo waxa dhulku soo dhaliyo, oo ah cagaarkeeda la cuno, Xinidh, Toon, cadas iyo Basal, wuxuuna ku yidhi mawaxaad ku bedalanaysaan wax xun kii khayrka badnaa, u (hoobta) daga masar waxaad helayaan waxaad warsateen, waxaana lagu qadaray dulli iyo miskiinimo, waxayna

وَأَذَقْنَاكَ بِمُوسَىٰ لَنْ نَصْبِرَ عَلَىٰ طَعَامِهِ وَحَدِيدٍ
فَأَنزَلْنَا لَكَ رَبِّكَ يُخْرِجُ لَنَا مِمَّا تُنْبِتُ الْأَرْضُ
مِنْ بَقْلِهَا وَقِثَّائِهَا وَفُومِهَا وَعَدَسِهَا وَبَصِلَهَا
قَالَ أَتَسْبِدُونَ الَّذِي هُوَ أَدْنَىٰ يَأْتِيهِمْ
خَيْرٌ أَهْطُوا مُضْرًا فَإِن لَّكُمْ مَأْسَأَةٌ وَضُرُرَتٌ
عَلَيْهِمُ الذَّلَّةُ وَالْمَسْكَنَةُ وَبَاءُ وَيَعْصَبُ مِنْ

lanoqdeen cadho Eebe, arrintaasna waxaa ugu wacan inay yihiin kuwo ka Gaalooba aayaadka Eebe, dilayeenna Nabiyada xaqla'aan, taasina waa caasinimadooda darteed iyo xadgudubkoodii.

62. kuwii rumeeyey iyo kuwii Yuhuudda ah iyo Nasaarada iyo saabi'iinta ciddii rumeysa Eebe iyo Maalintii dambe oo camal suubanna falay waxay ku leeyihiin Eebe agtiisa ajir, cabsina korkooda ma noqoto mana tiiraanyoodaan.

waxaa ka mid ah madax adayga iyo xumaan jacaylka Bani israa'il inay (Nabi) Muuse u sheegeen inayan ku samrayn cunno kaliya ee la siiyo toon, basal, bagal, iyo wax la mid ah, markaasaa Eebe ku canaantay arrintaas'farayna inay Masar aadaan waxay codsadeenna la siiyo dulli miskiinmana wa lagu qaddaray, cadho Eebena way la noqdeen, gaalnimadooda, dilidda Nabiyada xaq darro, caasinimadaa iyo xad gudubkooda, dartiis, Ruuxiise xaqa rumeeya oo Eebe, Rasuulkiisa malaa'igta, iyo qiyaame qira camal fiicanna fala, ama Muslin ha ahaado ama yuhuud islaantay, ama nassara islaantay, ama saabi'in islaamtay ajrina way heli cabsi iyo murug midna ma arkaan, mar haday xaqa si dhab ah u raaceen waxaana la sheegay inay aayaddu ku soo degtay markuu salmaan Alfaarisi wax warsaday Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Al-Baqarah (61-62).

63. Xusa markaan idinka qaadnay ballan (adag) oo korkiina yeelay (Buurta) Dhuur oon idinku nidhi ku qaata waxaan idinsiinay niyad adag, xusuustana waxa ku sugan, si aad u dhawrsataan.

64. markaasaad jeedsateen intaas ka dib, hadduusan jirin fadliga Eebe ee korkiina iyo naxariistiisa waxaad ahaan lahaydeen kuwa Khasaaray.

65. dhab ahaanbaad u ogtihiin kuwii xadgudbay Sabtida, oo idinka mid ah markaasaan ku nidhi noqda daanyerro la fageeyo (oo dullaysan).

66. waxaana kayeelay ciqaabtaas waanada waxa ka horeeya iyo wax ka danbeeyaba, iyo waano kuwa dhowrsada.

67. xusa markuu ku (yidhi) (Nabi)

اللَّهُ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَانُوا يَكْفُرُونَ بِعِبَادَةِ اللَّهِ
وَقَفَّاتُونَ النَّيِّبِينَ بِعَدْرِ الْحَقِّ ذَٰلِكَ بِمَا عَصَوْا
وَكَانُوا يَعْتَدُونَ ﴿٦١﴾

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَالَّذِينَ هَادُوا وَالنَّصَارَى
وَالصُّلَيْبِيَّةَ مِنْ ءَأْمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَعَمِلُوا
صَالِحًا فَلَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ
وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦٢﴾

وَإِذْ أَخَذْنَا مِيثَاقَكُمْ وَرَفَعْنَا فَوْقَكُمُ الطُّورَ
خُذُوا مَا ءَاتَيْنَاكُمْ بِقُوَّةٍ وَأَذْكُرُوا مَا فِيهِ
لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿٦٣﴾

ثُمَّ تَوَلَّيْتُمْ مِنْ بَعْدِ ذَٰلِكَ فَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ
وَرَحْمَتُهُ لَكُنْتُمْ مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٦٤﴾

وَلَقَدْ عَلِمْتُمُ الَّذِينَ ءَعْتَدُوا مَعَكُمْ فِي السَّبْتِ فَقُلْنَا
لَهُمْ كُونُوا قِرَدَةً خَاسِئِينَ ﴿٦٥﴾

فَجَعَلْنَاهَا نَكَالًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهَا وَمَا خَلْفَهَا
وَمَوْعِظَةً لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٦٦﴾

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَنْ

Muuse Qoomkiisa Eebe wuxuu idin fari inaad gawracdaan sac, waxayna dheheen miyaad nagu jees jeesi, wuxuuna yidhi waxaan ka magangali Eebe inaan ka mid noqdo Jaahiliinta.

تَذَبْحُوا بَقْرَةً قَالُوا أَتَتَّخِذُنَا هُرُوجًا قَالُوا أَعُوذُ بِاللَّهِ
أَنْ أَكُونَ مِنَ الْجَاهِلِينَ ﴿١٧﴾

Eebe wuxuu ka qaaday Banni Israa'iil ballan adag, wuxuu korkooda yeelay Buurta Dhuur'uuna faray inay ku gudoomaan Kitaabka Eebe siiyey niyad adag ooyna ku waantoobaan waxa ku sugan, wayse jeedsadeen intaas ka dib waxayna noqdeen kuwa khasaara haddaan Eebe Naxariisan, maalinta Sabtida ah oo la faray inay Qadariyaana way xadgudbeen, markaasaa Eebe ku yidhi noqda daanyeer dullaysan, si loogu waano qaato, looguna dhawrsado. Markalaa Eebe Imtixaanay markuu (Nabi) Muuse faray inay gawracaan Sac, taasoo Eebe amray waxayse dhaheen sidoodii xumayd waad nagu ciyaari, Nabi Muuse wuxuu yidhi waxaan ka magangalay Eebe inaan ka mid noqdo Jaahiliinta Dadka ku dheeldheesha, xaalkuna wuxuu ku saabsanaa si loosoo saaro nin oy iska dileen oon lana ogayn ciddii dishay. Al-Baqarah (63-67).

68. waxayna dhaheen noo bari Eebahaa ha noo caddeeyo waxay tahaye, wuxuuna yidhi Eebe wuxuu leeyahay waa sac oon duq ahayn yarayna, oo u dhaxaysa taas (labadaas) ee fala waxa laydin fari.

قَالُوا ادْعُ لَنَا رَبَّكَ يُبَيِّنُ لَنَا مَا هِيَ قَالَ إِنَّهُ يَقُولُ
إِنَّهَا بَقْرَةٌ لَا فَارِضٌ وَلَا يَكْفُرُ عَوْنٌ بَيْنَ
ذَلِكَ فَافْعَلُوا مَا تُؤْمَرُونَ ﴿١٨﴾

69. waxay dhaheen noobari Eebahaa ha noo caddeeyo Midabkeeda, wuxuuna yidhi Eebe wuxuu leeyahay waa sac Boora ah, booranimadeed darantahay, oo ka farxin (cajabin) kuwa eegi.

قَالُوا ادْعُ لَنَا رَبَّكَ يُبَيِّنُ لَنَا مَا لَوْ هِيَ قَالَ إِنَّهُ يَقُولُ
إِنَّهَا بَقْرَةٌ صَفْرَاءُ فَاقِعٌ لَوْنُهَا تَسُرُّ النَّاظِرِينَ ﴿١٩﴾

70. waxay dhaheen noo bari Eebahaa ha noo caddeeyo waxay tahay, maxaa yeelay waxaa is kaga kaana shabbahday (isu ekaatay) Lo'dee, hadduu Eebe donnana waan toosaynaa.

قَالُوا ادْعُ لَنَا رَبَّكَ يُبَيِّنُ لَنَا مَا هِيَ إِنَّ الْبَقَرَ تَشْبَهُ
عَلَيْهَا وَإِنَّا إِن شَاءَ اللَّهُ لَمُهْتَدُونَ ﴿٢٠﴾

71. wuxuu yidhi Eebe wuxuu leeyahay waa sac aan laylanayn oon qodayn dhulka, oon waraabinaayna Beerta, wayna ka nabadgashantahay (ceeb) midab kalana ma leh, waxay dheheen haddaad la timid dhabta, markaasay gawraceen Sicii, waxayna udhawaadeen inayna falin.

قَالَ إِنَّهُ يَقُولُ إِنَّهَا بَقْرَةٌ لَّدُولُ يُتَبَرُّ الْأَرْضِ
وَلَا تَسْقِي الْحَرْثَ مُسَامَةً لَّأَسِيَةِ فِيهَا قَالُوا
أَفَنَجِئُكَ بِالْحَقِّ فَذَبْحُوهَا وَمَا كَادُوا
يَفْعَلُونَ ﴿٢١﴾

Aayadahan waxay ka warrami Banni Israa'iil iyo madax adaygooda iyo siday isugu dhibeen Sici gawraca la yidhi, ay warsadeen da'deeda. Midabkeeda, Tilmaanteedaba, taasina waxay ku tusin ciddii wax isku adkeeya isagoo fudud in lagu dhibi siduu yidhi Ibnu Cabaas: Hadday qaadani lahaayeen Sacu ugu yar

way ku filaan lahayd, laakiin way isku adkeeyeen, Markaasaa lagu adkeeyey. Al-Baqarah (68-71).

72. xusa markaad disheen naf ood isku khilaafteen Eebana wuu soo bixin (muujin) Waxaad qarineyseen.

وَإِذْ قَتَلْتُمْ نَفْسًا فَادَّارَأْتُمْ فِيهَا وَاللَّهُ مُخْرِجٌ
مَا كُنْتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿٧٢﴾

73. waxaan ku nidhi ku garaaca kan la dilay Sac qaar kiis, saasuuna u nooleeyaa Eebe wixii dhintay, idiinna tusin aayaadkiisa si aad wax u kastaan.

فَقُلْنَا اضْرِبُوهُ بِبَعْضِهَا كَذَلِكَ يُخَيِّئُ اللَّهُ الْمَوْتَى
وَيُرِيكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٧٣﴾

74. markaasay ingagtay Quluubtiinu intaas ka dib, waxayna la mid tahay Dhagax, ama waa ka darantahay ingeega, Dhagaxyada waxaa ka mid ah kuway ka burqadaan wabiyaal, waxaana ka mid ah kuwo dildillaaca oo ay ka soo baxaan Biyo, waxaana ka mid ah kuwo hooban cabsida Eebe darteed, Eebana ma halmaansana waxaad camal falaysaan.

ثُمَّ قَسَتْ قُلُوبُكُمْ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ فَهِيَ كَالْحِجَارَةِ
أَوْ أَشَدُّ قَسْوَةً وَإِنَّ مِنَ الْحِجَارَةِ لَمَا يَتَّخِذُ مِنْهَا
الْأَنْهَارُ وَإِنَّ مِنْهَا لَمَا يَشْفَقُ فَيَخْرُجُ مِنْهُ الْمَاءُ
وَإِنَّ مِنْهَا لَمَا يَهْبِطُ مِنْ خَشْيَةِ اللَّهِ وَمَا اللَّهُ بِغَفِيلٍ
عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٧٤﴾

Saan horay u soo sheegnay waxay iska dileen Bani Israa iil Ruux, markaasaa la faray inay gawraacaan Sac si loobaadho ciddii wax dishay, hasayeeshee ay isku khilaafeen iskuna dhibeen, Eebana wuu muujiyey waxay qarinaayeen, waxaana Eebe faray in wax ka mida Sac lagu garaaco maydkii la dilay si uu u noolaado Eebana waa karaa inuu nooleeyo wixii dhintay sida Ruuxaas la dilay ee la soo nooleeyay, waxaase ingagtay quluubtodii Sida dhagaxa, ama ka daran, illeen dhagaxa waxaa ka mid ah mid wabiyaal ka dilaacaan iyo mid la dillaaca oo biyo ka yimaadaan iyo mid la hoobta cabsi Alle, wax walbana Eebe waa ogyahay mana halmaamo. In dhagax Eebe ka cabsadana la yaab maleh, maxaayeeley tasarufka Adduunka Eebaa iska leh, waxna ma daaliyo, (Nabigana Naxariis iyo nabadgilyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaan garan Dhagax ku yiil Maka oo i salaami jiray intaan lay bixinin. Waxaa wariyey Imaam Muslim. Al-Baqarah (72-74).

75. ma waxaad damcaysaan Mu'iniintaay inay rumeeyaan yuhuudda xaqa oy (idinraacaan) iyagoo koox ka mid ahi ay maqlayaan hadalka Eebe (Towreed) haddana ay xarriifan (leexiyaan) intay kaseen kadib, iyagoo og (inay gafsanyihiin).

﴿أَفَتَطْمَعُونَ أَنْ يُؤْمِنُوا لَكُمْ وَقَدْ كَانَ فَرِيقٌ
مِنْهُمْ يَسْمَعُونَ كَلِمَةَ اللَّهِ تَمَّ يُحْمَرُ فَوْقَهُ مِنْ بَعْدِ
مَا عَقَلُوهُ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٧٥﴾

76. markay la kulmaan kuwii rumeeyey (xaqana) waxay dhahaan waan rumaynay, markuu qaarkood qaarka kale la kaliyoobana waxay dhahaan ma wa-

وَإِذَا لَقُوا الَّذِينَ آمَنُوا قَالُوا آمَنُوا وَإِذَا
خَلَا بَعْضُهُمْ إِلَى بَعْضٍ قَالُوا أَتُحَدِّثُونَهُمْ

xaad uga sheekaynaysaan (u qireecy-saan) Mu'miniinta, waxa Eebe idiin furay (oo xaqnimada Nabiga-Muxamed ah) si ay idiinkula doodaan Eebe agtiisa miyaydaan waxkasayn.

يَمَافْتَحُ اللَّهُ عَلَيْكُمْ لِيُخَاجِرَكُمْ بِهِ عِنْدَ رَبِّكُمْ
أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٧٦﴾

77. miyayna ogayn in Eebe ogyahay waxay qarsan iyo waxay muujin.

أَوَلَا يَعْلَمُونَ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا يُسِرُّونَ وَمَا
يُعْلِنُونَ ﴿٧٧﴾

78. waxaa ka mid ah Ehelu Kitaabka kuwo aan wax qorayn waxna akh-riyeyn, oon aqooninna Kitaab (Two-reed) hasa yeeshee rumayn yididiilo, waxaan malo ahayna kuma socdaan.

وَمَنْهُمْ أُمِّيُونَ لَا يَخْتُمُونَ الْكِتَابَ إِلَّا أَمَانًا
وَلَنْ هُمْ إِلَّا يَظُنُّونَ ﴿٧٨﴾

79. halaag wuxuu u sugnaaday kuwa ku qoraya Kitaabka (Towreed) Gacmahooda hadana dhihi kani wuxuu ka yimid xagga Eebe si ay qiimo yar ugu gataan, halaag baana ugu sugnaaday waxay qori Gacmahoodu, halaag baana ugu sugnaaday waxay kasban.

قَوْلٍ لِلَّذِينَ يَكْتُمُونَ الْكِتَابَ بِأَيْدِيهِمْ ثُمَّ
يَقُولُونَ هَذَا مِنْ عِنْدِ اللَّهِ لِيُشْرُوا بِهِ وَمَا كُنَّا
قَلِيلًا قَوْلًا لَهُمْ وَمَا كُنَّا بِأَيْدِيهِمْ وَوَيْلٌ
لَهُمْ مِمَّا يَكْسِبُونَ ﴿٧٩﴾

Markuu Eebe soo sheegay madax adayga Yuhuudda iyo siday u fulinwaayeen amarka Eebe, iyo muranbadnidooda iyo xaqdiidnimadooda wuxuu raaciyay ceebahooda iyo Dambiyadooda badan, sida rumeyn la'aanta xaqa, leexinta macnaha Kitaabka, qarinta xaqnimada Nabiga Jaahilnimada qaarkood, yididiilo been ah ku noolida badalaada Kitaabka iyo ka ganasciga xaqa iyo xumaanno kale oo badan, Eebase wuu ogyahay wuuna arkaa wuuna ka abaalmarin, waxaana u sugnaaday jab iyo Halaag. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Yuhuuddu markay Mu'miniinta la kulmaan waxay dhihi jireen waa Nabi idinku gaar ah, markay isla kali yoobaana waxay dhihi sowkaad qirsanaydeen ma aha. Al-Baqarah (75-79).

80. waxay dhaheen yuhuud nama taabanayso naaru waxaan ayaamo tirsan ahayn, waxaad dhahdaa ma ballan baad ka qaadateen Eebe agtiisa oosan idinkaga baxayn Eebe ballankiisa. mise waxaad ku sheegaysaan waxaydaan ogayn.

وَقَالُوا لَنْ نَمَسَّ النَّارَ إِلَّا أَنْ يَأْتِيَنَا مَعْدُودَةٌ
قُلْ اتَّخَذْتُمْ عِنْدَ اللَّهِ عَهْدًا فَلَنْ يُخْلِفَ اللَّهُ
عَهْدَهُ أَمْ تَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٨٠﴾

81. saas ma aha ee ruuxii kasbada xumaan oo uu koobo gafkiisu ciddaasi waa asaxaabta naarta, wayna ku waari dhexdeeda.

بَلْ مِنْ كَسَبِ سَيِّئَةٍ وَأَحْطَتْ بِهِمْ خَطِيعَتُهُمْ
فَأُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٨١﴾

82. kuwa rumeeyey (xaqse) oo camal wanaagsan sameeya kuwaasi waa asa-

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أُولَئِكَ

xaabta Jannada wayna kuwaari dhexdeeda.

أَصْحَابُ الْجَنَّةِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٨٢﴾

83. xusa markaan ka qaadnay Bani Israa'iil ballan inaydaan caabudin Eebe mooyee, iyo inay u sama falaan labada Waalid iyo qaraabada, agoonta masaa-kiinta iyo inay u dhahaan wanaag dadka, salaaddana oogaan bixiyaana sakada, markaasaad jeesateen in yar oo idinka mid ah mooyee, idinkoo jeesdan.

وَإِذْ أَخَذْنَا مِيثَاقَ بَنِي إِسْرَائِيلَ لَا تَعْبُدُونَ إِلَّا اللَّهَ وَيَالِ الْوَالِدِينَ إِحْسَانًا وَذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسْكِينِ وَقُولُوا لِلنَّاسِ حُسْنًا وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ ثُمَّ تَوَلَّيْتُمْ إِلَّا قَلِيلًا مِّنْكُمْ وَأَنْتُمْ مُّعْرِضُونَ ﴿٨٣﴾

Eebe wuxuu buriyay sheegashadi Yuhuudda ee ah inaan Naaru taabanayn muddo yaroo tirsan mooyee oo ah ayaamahay caabudeen Dibiga, wuuse ku beeniyey Eebe una cadeeyey inayan wax ballan ah Eebe ka qaadin ee ay ku hadli wax been ah ooyana u cilmi lahayn, cidiise xumaan kasbata dambigeeduna koobo waxay noqon Naarta Ehelkeeda, kuna waari'Mu'miniinta xaqa rumeeyayse wanaagana fala waxay gali kuna waari Jannada, wuxuuna Eebe cadeeyey ahmiyadda Eebe kaliya oo la caabudo, iyo in loo sama falo, waalidka, Qaraabada, agoonta, Masaakiinta, hadalwanaagsan oo loodhaho dadka, iyo salaadda iyo Sakada oo la guto, hase yeeshee gaalo way ka jeesatay. Cabdullaahi Ibnu Maseud waxaa laga wariyay innu yidhi: Rasuulka Eebow camalkee u fiican? Wuxuuna yidhi: Salaadda oo waqtigeeda la guto, maxaa ku xiga? Labada Waalid oo loo samo falo, hadana maxaa ku xiga? wuxuu yidhi: Jidka Eebe oo lagu jahaado, waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Al-Baqarah (80-83).

84. xusa markaan idinka qaadnay ballan (adag) inaydaan iska daadin Dhiig (inaydaan isdilin) aydaan qaarkiin (qaarka kale) Guryihiinna ka bixinin, markaasaad aqoonsateen arrintaas idinkoo marag furi.

وَإِذْ أَخَذْنَا مِيثَاقَكُمْ لَا تَسْفِكُونَ دِمَاءَكُمْ وَلَا تُخْرِجُونَ أَنْفُسَكُمْ مِنْ دِينِكُمْ ثُمَّ أَقْرَرْتُمْ وَأَنْتُمْ تَسْهَوْنَ ﴿٨٤﴾

85. haddana waxaad ahaateen kuwo dili Naftooda, oo ka erya kooxo idinka mid ah Guryahooda, idinkoo isugu kaalmayn korkooda dambi iyo colnimo, haddii la qafaashana waad furanaysaan, iyadooy dhartu tahay inay xaraan idinka tahay bixintoodu, Miyaad rumaynaysaan Kitaabka qaarkiis, kana gaaloobaysaan qaar, ruuxii saas fala oo idinka mid ah abaalkiisu ma aha dulli adduun iyo maalinta qiyaame oo loo celin cadaab daran mooyee, Eebana ma halmaamayo waxaad falaysaan.

ثُمَّ أَنْتُمْ هَؤُلَاءِ تَقْتُلُونَ أَنْفُسَكُمْ وَتُخْرِجُونَ فَرِيقًا مِّنْكُمْ مِّن دِينِهِمْ تَظَاهِرُونَ عَلَيْهِمْ بِالْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ وَإِن يَأْتُوكُمْ أُسْرَىٰ فَتُدْوَهِمُ وَهُوَ مُحَرَّمٌ عَلَيْكُمْ إِخْرَاجُهُمْ أَفَتُؤْمِنُونَ بِبَعْضِ الْكِتَابِ وَتَكْفُرُونَ بِبَعْضٍ فَمَا جَزَاءُ مَن يَفْعَلْ ذَلِكَ مِنْكُمْ إِلَّا خِزْيٌ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ يُرَدُّونَ إِلَىٰ أَشَدِّ الْعَذَابِ وَمَا اللَّهُ بِغَافِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٨٥﴾

86. kuwaasina waa kuwa ku gatay

أُولَٰئِكَ الَّذِينَ اشْتَرُوا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا بِالْآخِرَةِ

nołosha adduunyo (ee dhaw) aakhiro, lagamana fududeeyo xaggooda cadaabka loomana gargaaro.

فَلَا يُخَفِّفُ عَنْهُمْ الْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٨٦﴾

Aayadahan wuxuu Eebe ku sheegay xaalkii Yuhuudda Joogtay waqtigii Nabiga (Naxiriis iyo Nabadgalyo korkiisa ha yelee) iyo wixii ballan laga qaaday inayna islaynin, haseyeeshee ay khilaafeen isna laayeen isna bixiyeen, haddii qaar la qafaashana oy furan jireen, taasina waa Kitaabka qaarkiis oo la rumeeyay qaarna laga gaalobay, ciddii taas fashana waa kuwa adduunyada ku gatay aakhiro, cadaab daranna way mudan'qiyaamada'ayaduhuna waxay canaan ruux kasta oon xaqa suu yahay ugu dhaqmin, ama Yuhuud ha ahaato ama cid kale. Al-Baqarah (84-86).

87. dhab ahaan yaan u siinnay (Nabi) Muuse Kitaabka, waxaana raacinnay gadaashiis Rasuullo, waxaana siinnay (Nabi) Ciise Ibnu maryama Mucjizaad cad cad, waxaana ku xoojinay ruux daahir ah (Jibriil) markastoose idiinla yimaaddo rasuul waxaan naftiinu jeclayn (xaqa) ma iskibrisaan, koox waad beenisaan, kooxna waa dishaan.

وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ وَقَفَّيْنَا مِنْ
بَعْدِهِ بِالرُّسُلِ وَآتَيْنَا عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ
الْبَيِّنَاتِ وَإِنَّا لَهُ رُوحُ الْقُدُسِ أَفَكُلَّمَا جَاءَكُمْ
رَسُولٌ بِمَا لَا تَهْتَوْنَ أَنْفُسَكُمْ أَسْتَكَبَرْتُمْ فَرِيقًا
كَذَّبْتُمْ وَفَرِيقًا تَقْتُلُونَ ﴿٨٧﴾

88. waxayna dheheen yuhuud quluubtanadu waxay ku sugantahay dabool, taas ma aha ee waa la nacladay gaalnimadooda darged wax yar bay rumeeyn.

وَقَالُوا قُلُوبُنَا غُلْفٌ بَلْ لَعَنَهُمُ اللَّهُ بِكُفْرِهِمْ
فَقَلِيلًا مَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٨٨﴾

89. markuu uga yimid Yuhuud Kitaab xagga Eebe isagoo rumeeyn waxa agtooda ah (Tawreed) horayna u ahaayeen kuwa ka rajeeya soo bixinta Nabi Maxamad inay kaga gargaarsadaan kuwii gaalobay, markuu yimid waxay garanayeen way ka gaalobeen Nabiga, naclad korkooda ha ahaato, gaaladee.

وَلَمَّا جَاءَهُمْ كِتَابٌ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ مُصَدِّقٌ لِمَا
مَعَهُمْ وَكَانُوا مِنْ قَبْلُ يَسْتَفْتِحُونَ عَلَى
الَّذِينَ كَفَرُوا فَلَمَّا جَاءَهُمْ مَا عَرَفُوا كَفَرُوا
بِهِ فَلَعَنَهُ اللَّهُ عَلَى الْكَافِرِينَ ﴿٨٩﴾

Yuhuudu hadal qallocan iyo xumaan ma waydo 'halkanna markii xaqu u yimid Quraanka iyo Nabiga yey sheegteen inay qalbiga ka daboolanyihiin, markaasuu Eebe nacladay'maxaa yeelay wax yar bay rumeeyn, wayna yaqiiniyeen Nabiga iyagoo ku dhihi jiray gaalada kale waxaa la soo bixin Nabi intaan la safanno naloo gargaari'wax lala yaabana ma aha in Eebe soo diro Nabi siduu Nabiyo badanba u bixiye. Xudayfe waxaa laga wariyey: Quluubtu waa afar, waxaana ka mid ah Qalbi daboolan oo loo cadhooday waana qalbiga gaalka, Waxaa wariyey ibnuabiishayaba iyo ibnuabidunayaa Kitaabkiisa "ikhlaas". Al-Baqarah (87-89).

90. waxaa u xun waxay ku gataan Naftooda inay ka gaalobeen xaqa

بِسْمِ الْأَشْرَافِ بِهِءَ أَنْفُسُهُمْ أَن يَكْفُرُوا بِمَا أَنْزَلَ
اللَّهُ بَغْيًا أَن يُنَزَّلَ اللَّهُ مِنْ قَضَائِهِ عَلَى مَنْ يَشَاءُ مِنْ

Eebe soo dajiyey xasad dartiis, ku soo dajinta Eebe fadligiisa ciduu doono, oo adoomadiisa ka mid ah, waxayna la noqdeen Cadho Cadho kale lagu kordhiyey, gaalana waxaa u sugnaaday cadaab wax dulleeya.

عِبَادِ ۞ فَبَاءُ وَيَعْصِبُ عَلَىٰ عُنُوبِهِ
وَالْكَافِرِينَ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿٩٠﴾

91. marka lagu yidhaah Yuhuudda rumeeya waxa Eebe soo dajiyey waxay dhahaan waxaannu rumeeyn waxa nalagu soo dejiyey, wayna ka gaalobaan waxa ka dambeeyey, isagoo xaq ah oo rumeeyn waxa agtooda ah, waxaad dhahdaa maxaad ugu disheen nabiyada Eebe horay haddaad Mu'miniin tihiin.

وَإِذْ قِيلَ لَهُمَ آمِنُوا بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ قَالُوا نَوْءٍ مِّمَّا
أَنْزَلَ عَلَيْنَا وَكُفْرُوتٍ بِمَا وُرِّدَ بِهِ وَهُوَ الْحَقُّ
مُصَدِّقًا لِّمَا مَعَهُمْ ۗ قُلْ فِيمَ تَقْتُلُونَ أَنْبِيَاءَ اللَّهِ
مِنْ قَبْلُ إِنْ كُنْتُمْ مُّؤْمِنِينَ ﴿٩١﴾

92. dhab ahaan yuu idiin la yimid (Nabi) Muuse mucjisooyin, markaa-saad yeelateen Dibi (ilaah) isaga kadib idinkoo daalimiin ah.

۞ وَلَقَدْ جَاءَكُمْ مُّوسَىٰ بِآيَاتِنَا ثُمَّ
اتَّخَذْتُمُ الْعِجْلَ مِنْ بَعْدِهِ وَأَنْتُمْ
ظَالِمُونَ ﴿٩٢﴾

Ganacsi waxaa u xun xaqoo la naco oo xumaan la raaco, isagoo xasad iyo dulmi ku madax taagi sida Yuhuudii Nabiga diiday, kuwaasoo marka la faro inay Quraanka iyo Nabiga raacaan sheegi inay rumayn Tawreed wixii ka dambeeyeyna ay ka gaalobi'inkastoos xaq yahay u rumeynna Tawreed, waase beentood Yuhuudu'maxaa yeelay waxay laynjireen Nabiyaddii hore, Dibina way caabudeen iyagoo daalimiin ah. Abul Caaliya wuxuu yidhi: Cadhada hore waxay ku dhacday markay beeniyeen Nabi Ciise iyo Kitaabkii Injiil, tan kalana markay beeniyeen Nabi Muxamed (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) iyo Quraanka. Al-Baqarah (90-92).

93. xusa markaan idinka qaadnay ballan, korkiinana yeelay (Buurta Dhuur) oon idinku nidhi ku qaata waxaan idin siinay xoog (niyadadag) maqlana (xaqa) waxayna dheheen waan maqalay waana caasinay, waxaana laga waraabiyey quluubtooda (jacaylkii) Dibiga (ay caabudeen) gaalnimadooda darteed, waxaad dhahdaa waxaa xumaan badan wuxuu idin farayo iimaankiinnu haddaad muuminiin tihiin.

وَإِذْ أَخَذْنَا مِيثَاقَكُمْ وَرَفَعْنَا فَوْقَكُمُ
الطُّورَ خُذُوا مَا آتَيْنَاكُمْ بِقُوَّةٍ وَاسْمَعُوا
قَالُوا سَمِعْنَا وَعَصَيْنَا وَأَنْشُرُوا فِي قُلُوبِهِمْ
الْعِجْلَ بِكُفْرِهِمْ ۗ قُلْ يَسْمَأَيَا مَرْكُم بِهِ
إِيْمَانُكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُّؤْمِنِينَ ﴿٩٣﴾

94. waxaad dhahdaa hadday daarta aakhiro idinka uun idiinsugnaatay Dadka kale ka sokow jeclaada geeri haddaad run sheegaysaan.

قُلْ إِنْ كَانَتْ لَكُمْ الدَّارُ الْآخِرَةُ عِنْدَ اللَّهِ
خَالِصَةً مِنْ دُونِ النَّاسِ فَتَمَنَّوْا الْمَوْتَ إِنْ
كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٩٤﴾

95. mana jeclanayaan (Geerida) wali-good, waxay hormarsadeen Gacmahoodu darteed Eebana waa ogyahay daalimiinta.

وَلَنْ يَتَمَنَّوْهُ أَبَدًا بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ
بِالظَّالِمِينَ ﴿٤٥﴾

96. dhab ahaan waxaad ugu ogaan Yuhuudda inay ugu dadaal badanyihiin nolosha, kuwa Gaalada ah qaarkood wuxuu jecelyahay in la cimrisiyo kun Sano, cimrigaasna kama fogeeyo cadaab Eebana waa arkaa waxay camal fali.

وَلَتَجِدَنَّهُمْ أَحْرَصَ النَّاسِ عَلَى حَيَاتِهِمْ وَمِنَ الَّذِينَ
أَشْرَكُوا يُوَدُّ أَحَدُهُمْ لَوْ يُعَمَّرَ أَلْفَ سَنَةٍ وَمَا هُوَ
بِمُرْتَضٍ بِهِ مِنَ الْعَذَابِ أَنْ يُعَمَّرَ وَاللَّهُ بَصِيرٌ بِمَا
يَعْمَلُونَ ﴿٤٦﴾

Yuhuud waligeed way Madax adkeyd, sidii horay u soo martayna waxaa korkooda la yeelay Buurta Dhuur si ay u qaataan xaqa iyo Kitaabkii Tawreed, wayse caasiyeen oo jecladeen dibi caabudidiis, waxaasina liimaan ma aha, waxayna arrintaas ku dareen inay sheegan inay jannadu iyaga u sugnaatay, hadday taasi run tahayna waxay jeclaan lahaayeen geeri, mase jecla wax ka naf jecella ma jiro, kun Sano ruux jirana wax ugama tarto Cadaab, arrintaas Yuhuudda lagu sheegay cidaan ka leexanba waxba isma dhaamaan, adduunyo layska dabaridana wax ma tarto. Al-Baqarah (93-96).

97. Waxaad dhahdaa ruuxii Col u ah (Malaku) Jibriil (waa Colka Eebe) ma-xaayeelay wuxuu ku dajiyey Qalbigaaga Idin Eebe dartiis, isagoo rumeyn Qu-raanka wixii ka horeeyey waana Ha-nuunka iyo Bishaarada Mu'miniinta.

قُلْ مَنْ كَانَ عَدُوًّا لِجِبْرِيْلَ فَإِنَّهُ كَانَ عَدُوًّا
لِقَوْلِكَ بِإِذْنِ اللَّهِ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ
وَهُدًى وَبَشْرًا لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

98. ruuxii col Eebe ah, Malaa'igtiisa, Rasuuladiisa, Jibriil iyo Miikaa'iil Eebana Colbuu u yahay Gaalada.

مَنْ كَانَ عَدُوًّا لِلَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَرُسُلِهِ
وَجِبْرِيْلَ وَمِيكَالَ فَإِنَّ اللَّهَ
عَدُوٌّ لِلْكَافِرِينَ ﴿٤٨﴾

99. dhab ahaan yaan kuugu dajinay Aayaad Cad cad kamana gaaloobo Faasiq cid aan ahayn.

وَلَقَدْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ آيَاتٍ بَيِّنَاتٍ وَمَا يَكْفُرُ
بِهَا إِلَّا الْفَاسِقُونَ ﴿٤٩﴾

100. markastoy ballantamaana Yuhuuddu waxaa tuura (buriya) ballanka koox ka mid ah, saas ma ahee Yuhuudda badankood waxba ma rumeeyn.

أَوْ كَلِمَاتٍ عَاهَدُوا عَاهِدًا نَبَذَهُ فَرِيقٌ مِّنْهُمْ لَعَلَّ
أَكْثَرَهُمْ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٥٠﴾

101. markuu uga yimid Rassuulku xagga Eebe isagoo rumayn waxa agtooda ahna (Tawreed) waxay ka tuuraan koox ka mid ah kuwii Kitaabka la siiyey (culimada Yuhuudda) Kitaabka Eebe Dhabarkooda Gadaashiisa, waxayna la mid yihiin iyagoon garanayn.

وَلَمَّا جَاءَهُمْ رَسُولٌ مِّنْ عِنْدِ اللَّهِ مُصَدِّقًا لِّمَا
مَّمَّنَّهِمْ بِنَبَأٍ مِّنْ أَلَدِينَ أَوْتُوا
الْكِتَابَ كِتَابَ اللَّهِ وَرَأَوْهُم ظُهُورَهُمْ
كَأَنَّهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥١﴾

Aayadahani waxay soo dageen markay Yuhuuddu sheegteen in Malaku Jibriil Col u yahay, taasina waxay ku tusin Madaxadeygooda iyo xaqdiidnimadooda intay kala colloobaan Malaga waxyiga ku soo dajiya Nabiyada, ma waxse lala colloobaa Malag idanka Eebe ku soo gaadhsiya xaqa, Eebana wuu la Colloobi cidii la Colloowda Malaa'igiitsa, beeniyana Quraanka lagu soo dajiyey Nabiga Muxamed ah, Yuhuuddana waxaa caadadooda ka mid ah inay buriyaan ballanada, beeniyaana wixii sugi xaqnimada Nabiga Muxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) xataa Kitaabkooda Tawreedba ha ahaadee. Al-Baqarah (97-101).

102. waxay raaceen Gaaladii Yuhuuddu waxay Shayaadiintu Akhriyaysay waqtigii xukunkii Nabi Suleymaan, ma Gaaloobin Nabi Suleymaan, laakiin Shayaadiinta yaa Gaalowday, waxayna baraan Dadka Sixirka, iyo wixii lagu soo dajiyey labadii Malag ee Baabil joogay ahaana Haaruut iyo Maaruut, mana baraan cidna intay uga dhahaan waxaan uun nahay Fidnee ha Gaaloobin, waxayna ka bartaan xagooda wax kalageeya Ninka iyo Haweenaydiisa, kumana dhibaana ruuxna idinka Eebe la'aantiis, waxayna bartaan Dadkaasu wax dhiba oon anfacayn, dhab ahaan yey u ogaadeen Yuhuuddu ruuxii sixir barta inuusan Aakhiro nasiib ku lahayn, waxaana baasleh Sixirkay Naf-tooda ku gateen hadday wax ogyihiin.

103. hadday kuwa (Sixirkabaran) ru-meeyaan xaqa oy dhawsadaan wanaag ku abaalmarinta Eebe yaa u Khayr roon hadday ogyihiin.

Yuhuuddu waxay raaceen oo ku dhaqmeen Sixir intay ka jeedsadeen xaqa, iyo Kitaabadii Eebe. Nabi Suleymaan xaqa kama leexan, hasayeeshee waxaa Gaaloobay Shayaadiintii Dadka sixirka barjiiray, Sixir iyo xumaan ciddii ku dhaqanta nasiib kuma laha aakhiro, waxaana Dadka u khayr roon Cabsi Eebe iyo rumeyntiisa, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ruuxii u taga Kaahin wax sheegaha ama Sixirre u rumeeya wuxuu sheegi, wuxuu ka gaaloobay wixii lagu soo dajiyey Nabiga Muxamad ah. waxaa wariyey Nasaai. Al-Baqarah (102-103).

104. kuwa xaqa rumeeyow ha dhicina na ilaali ee dhaha na sug maqlana, Gaalana waxaa u sugnaaday cadaab daran.

105. ma jecla kuwii Gaaloobay oo ehelu

وَاتَّبِعُوا مَا تَتْلُوا الشَّيْطَانُ عَلَىٰ مَلَكٍ سَلِيمٍ ۖ وَمَا كَفَرَ سَلِيمٌ وَلَا كَانَ الشَّيْطَانُ كَقُرْآنٍ يُعَلِّمُونَ النَّاسَ السِّحْرَ وَمَا أُنزِلَ عَلَىٰ الْمَلَائِكَةِ بِإِذْنِ هَرُونَ ۖ وَمَا يَعْلَمَانِ أَحَدٌ حَقًّا يَقُولَانِ إِنَّمَا نَحْنُ فِتْنَةٌ فَلَا تَكْفُرْ ۖ فَيَتَعَلَّمُونَ مِنْهُمَا مَا يُفَرِّقُونَ بِهِ بَيْنَ الْمَرْءِ وَرَجُلِهِ ۚ وَمَا هُمْ بِبَصِيرِينَ بِهِ مِنْ أَحَدٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ ۖ وَيَتَعَلَّمُونَ مَا يَضُرُّهُمْ وَلَا يَنْفَعُهُمْ ۚ وَلَقَدْ عَلِمُوا لَمَنِ اشْتَرَاهُ مَا لَهُ فِي الْآخِرَةِ مِنْ خَلْقٍ ۚ وَلَيْسَ مَا شَرَوْا بِهِ أَنفُسَهُمْ لَوْ كَانُوا يَعْلَمُونَ ﴿١٠٢﴾

وَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ ۚ وَأَتَقُوا لِمُؤْمِنَةٍ مِّنْ عِنْدِ اللَّهِ خَيْرٌ لِّوَكَاةٍ ۚ وَأُولَٰئِكَ يَعْلَمُونَ ﴿١٠٣﴾

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَقُولُوا رَاعِنَا وَقُولُوا إِنَّا نَرَا وَأَسْمَعُوا ۗ وَلِلَّكَفَرِينَ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٠٤﴾

مَا يَزِيدُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ

Kitaabka ahaa (Yuhuud iyo Nabsaara) iyo Gaaladii Carbeed in laydinku soo dajiyo khayr xagga Eebe ka yimid, Eebana wuxuu ku kaliyeelaa Naxariistiisa ruuxuu doono, Eebana fadligiisu (Khayrkiisu) waa waynyahay.

وَلَا الْمُرْكِبِينَ أَنْ يَرْكَبَ عَلَيْهِمْ مِنْ خَيْرٍ مِنْ رَبِّكُمْ ۗ وَاللَّهُ يَخْتَصُّ بِرَحْمَتِهِ مَنْ يَشَاءُ ۗ وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ الْعَظِيمِ ﴿١٥﴾

106. waxaan nasakhno (Nasakhu waa in Xukun sharci ah lugu beddelo daliil ka dambeeyey) oo aayad ah ama aan dib u dhigno waxaan keenaynaa mid ka khayrbadan ama la mid ah, miyaadan ogayn in Eebe wax kasto uu karo.

* مَا نَسَخَ مِنْ آيَةٍ أَوْ نُنسِهَا نَأْتِ بِخَيْرٍ مِنْهَا أَوْ يُمْلِكُ اللَّهُ أَلْتَقَاتِ اللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٦﴾

107. miyaadan ogayn in Eebe leeyahay xukunka Samaawaadka iyo Dhulka, idinmana sugnaanin Eebe ka sokow sookeye jecel iyo gargaare midna.

أَلْتَقَاتِ أَنْ اللَّهُ لَهُ مَلَكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِينَ وَمَا لَكُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿١٧﴾

108. mise waxaad dooneeysaan inaad wax warsataan Rasuulkiinna sidii loo warsaday (Nabi) Muuse mar hore ruuxii ku bedasha Gaalnimo Iimaan wuxuu ka dhumay Jidka toosan.

أَفَرَأَيْتُمْ أَنْ تَسْأَلُوا رَسُولَكُمْ كَمَا سَأَلْتُمْ مُوسَىٰ مِنْ قَبْلُ ۗ وَمَنْ يَتَّبِعِ الْكُفْرَ بِالْإِيمَانِ فَقَدْ ضَلَّ سَوَاءَ السَّبِيلِ ﴿١٨﴾

Diinta Islaamku ma ogola in laysku shabbaho Gaalada, ama xagga hadalka, ama Camalka, dhaqanka iyo wax kasto keeni shakhsiyadda Muslimka, Eebana fadligiisu waa badanyahay'cidduu doono yuuna u naxariistaa, wixii xukun ah oo Eebe tirana ama dib u dhigo, wuxuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeele) ku soo dajinjiray mid ka khayrbadan ama lamid ah, wax lala yaabana ma aha maxaa yeelay Eebaa abuuray Dadka isagaana og dantooda'wax walbana awooddiisay ku jirtaa, warsi iyo Su'aal aan qiimo lahaynaa waa baadinimo iyo xaq ka leexasho, oo la mid ah tay Yuhuudu warsatay (Nabi) Muuse, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeele) wuxuu yidhi: Eebe wuxuu idinka reebay Muran, Xoolo hallayn iyo warsi badan oo macno darro, waxaa wariyey Saxiixayn. Al-Baqarah (104-108).

109. waxay jecelyihiin in badan oo ehelu Kitaab ah (Yuhuud iyo Nasaara) inay idiin celiyaan iimaankiina ka dib Gaalo, Xasad naftooda ka yimid dartiis, intuu xaqu u caddaaday ka dib, ee iska cafiya iskana saamaxa inta Eebe ka keeni amarkiisa (la dagaallankooda ama islaamkooda) Eebana wax kasta wuu karaa.

وَدَكَثِيرٌ مِنَ أَهْلِ الْكِتَابِ لَوِيذٌ لَكُمْ مِنْ بَعْدِ إِيمَانِكُمْ كُفْرًا حَسَدًا مِنْ عِنْدِ أَنْفُسِهِمْ مِنْ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ الْحَقُّ فَأَعْتَوْا وَأَصْبَحُوا حَتَّىٰ يَأْتِيَ اللَّهُ بِأَمْرٍ ۗ إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٩﴾

110. Salaaddana ooga sakadana bixiya

وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَمَا تَقَدَّمُوا

waxaad u hormarsataan Naftiina oo khayr ah waxaad ka haysaan Eebe agtiisa, Eebana waxaad camalfalaysaan waa arkaa.

لَا تَنْفُسُكُمْ مِنْ خَيْرٍ يَجِدُوهُ عِنْدَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١١٠﴾

111. waxay dhaheen ma galo Jannada ruuxaan Yuhuud ahayn ama Nasaaro, taasina waa yididiilo (been ah) waxaad dhahdaa keena xujadiina haddaad run sheegeysaan.

وَقَالُوا لَنْ يَدْخُلَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَن كَانَ هُودًا أَوْ نَصْرِيًّا تِلْكَ أَمَانِيُّهُمْ قُلْ هَاتُوا بُرْهَانَكُمْ إِن كُنتُمْ صَادِقِينَ ﴿١١١﴾

112. Ruuxiise u hogaamiya Wajigiisa Eebe isagoo sama fala ah, wuxuu ku leeyahay Ajrigiisa Eebe agtiisa, mana cabsadaan mana walbahaaraan.

بَلَىٰ مَنْ أَسْلَمَ وَجْهَهُ لِلَّهِ وَهُوَ مُحْسِنٌ فَلَهُ أَجْرُهُ عِنْدَ رَبِّهِ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿١١٢﴾

113. Yuhuud waxay tidhi Nasaaro waxba ma aha, Nasaarana waxay tidhi Yuhuudu wax ma aha, iyagoo akhrin Kitaabka (Tawreed iyo Injiilba) saasay dhahaan kuwaan wax ogayna "Gaaladii Carbeed", hadalkoodoo kale Eebana wuu kala xukumin dhexdooda Maalinta Qiyaame waxay isku diidanaayeen.

وَقَالَتِ الْيَهُودُ لَيْسَتِ النَّصْرِيَّةُ عَلَىٰ شَيْءٍ وَقَالَتِ النَّصْرِيَّةُ لَيْسَتِ الْيَهُودُ عَلَىٰ شَيْءٍ وَهُمْ يَتْلُونَ الْكِتَابَ كَذَلِكَ قَالَ الَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ مِثْلَ قَوْلِهِمْ فَاللَّهُ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فِيمَا كَانُوا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿١١٣﴾

Gaalo waxay jecelyihiin in Muslimiintu Gaaloobaan oo xaqa ka leexdaan Xasad iyo Xumaan darted, waase in xaqa lagu sugnaado warkoodana aan la maqlin, waxay kaloo sheegeen Yuhuud iyo Nasaaraba in mid walba iyadu xaqa ku taagantahay ee tan kale ayna waxba ahayn, Janno galideed iyo hanunkuna ma aha sheegasho ee waa toosni iyo camal fiican oo la falo, taas darteed yuu eebe ku ballanqaaday inuu kala bixin Dadka Maalinta Qiyaame waxay isku diidanaayeen, waxaana sugnaatay in Nabigu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Cidii camal fasha waxaan Camalkanaga ahayn waa wax la tuuri (la aqbalayn). Al-Baqarah (109-113).

114. cidna kama dulmi badna ruux reebay (diiday) in masaajidda Eebe dhexdeeda lagu xuso Magaciisa, una camal fala say u kharaabi lahayd (Masaajiddu) kuwaas (Gaalada ah) Xaq uma leh inay galaan Masaajidda iyagoo cabsan mooyee, Adduunka waxy ku mudan dulli Aakhirana Cadaab Wayn.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ مَنَعَ مَسْجِدَ اللَّهِ أَنْ يُدْكَرَ فِيهَا اسْمُهُ وَسَعَىٰ فِي خَرَابِهَا أُولَٰئِكَ مَا كَانَ لَهُمْ أَنْ يَدْخُلُوهَا إِلَّا خَائِفِينَ لَهُمْ فِي الذُّنُوبِ الَّتِي سَازَوْا وَلَهُمْ فِي الآخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١١٤﴾

115. Qorax ka soo bax iyo u Dhacba Eebaa iska leh, meel kastood u jeedsa-taanna waa Jaho Eebe (markaad Qi-

وَاللَّهُ الْمُسْرِقُ وَالْمُصْرِفُ فَانبَسُوا نَوْمًا فَأَوْتَوْا فَسَبَّوهُ وَجَبَّ اللَّهُ عَنْ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ وَسَّعٌ عَلِيمٌ ﴿١١٥﴾

blada garanweydaan) Eebana waa waa-sac (Naxariistiisu) wax walbana og.

116. waxay dhaheen Gaaladii wuxuu yeeshay Eebo Ilmo, waana ka nasahanyahay, saas ma aha ee waxaa u sugnaaday Eebe waxa ku jira Samada iyo Dhulka, dhamaanna Eebay u hogaansamaan.

وَقَالُوا اتَّخَذَ اللَّهُ وَلَدًا سُبْحٰنَهُ ۗ بَلْ لَّهُ مَا فِي السَّمٰوٰتِ وَالْاَرْضِ كُلُّ لَّهُ قٰنُوْنٌ ﴿١١٦﴾

117. isagaa abuuray Samooyinka iyo Dhulka, markuu doono arrinna wuxuu uun dhahaa ahaw wuuna ahaadaa.

بَدِيعُ السَّمٰوٰتِ وَالْاَرْضِ ۗ وَاِذَا اَفْضٰى اَمْرًا فَاِنَّمَا يَقُوْلُ لَهُ ۙ كُنْ فَيَكُوْنُ ﴿١١٧﴾

118. waxay dhaheen kuwii aan wax ogayn (Gaaladii) muxuu Eebe noola hadli waayey ama noogu imaan wayday aayad, saasoo kale dhaheen kuwii ka horreeyey hadalkooda oo kale, waxaa is Shabbahday (isu ekaatay) quluubtooda dhab ahaan yaan aayadaha ugu cad-daynay ciddii wax yaqiin.

وَقَالَ الَّذِيْنَ لَا يَعْلَمُوْنَ لَوْلَا يَكْتُمُ اللّٰهُ اٰرْوٰتِنَا ۗ اَيُّهُۥ كَذٰلِكَ قَالَ الَّذِيْنَ مِنْ قَبْلِهِمْ مِثْلَ قَوْلِهِمْ تَشٰهَدْتُمْ قُلُوْبُهُمْ قَدْ بَيَّنَّا الْاٰيٰتِ لِقَوْمٍ يُوقِنُوْنَ ﴿١١٨﴾

Cid kaDulmi badan ma jiro ruux reebay in la nooleeyo Masaajidda Eebe'laguna xuso Magaciisa'inuu kharaabana doona'cidda saasyeesha waa in la cabsi galiyo, dulli baana u sugnaaday Adduun iyo Aakhiraba, Adduunkana Eebaa iska leh'meelkastood ujeedsato, ama Sunada ama ciddii wareerta, Eebana waa ka nasahanyahay Caruur, wuxuu iska leeyahay waxa ku sugan Cirka iyo Dhulka, wax walbana Eebuu u hogaansamaa'wuxuu doonana wuu ahaadaa, Gaaladuna waxay had iyo jeer warsadaan waxyaalo waawayn'iyagoo hadalku isku midyahay'waxaana ugu wacan inayan wax yaqiinsanayn, Zayd wuxuu yidhi: Cidna uma haboona inuu baytka Dadka ka Celiyo. Al-Baqarah (114-118).

119. anagaa ku dirray Nabiyow adoo xaq wata oo Bishaarayn Digana, lagu warsanna mayo ehelka (Naarta) Jaxiimo.

اِنَّا اَنْزَلْنٰكَ بِالْحَقِّ بَشِيْرًا ۗ وَنَذِيْرًا ۗ وَلَا تَسْتَعْلٰنَ اٰصْحٰبَ الْجَبْرِ ﴿١١٩﴾

120. Kaama raalli noqdaan Yuhuud iyo Nasaara intaad ka raacdo Diintooda, waxaad dhahdaa hanuunka Eebaa hanuun ah, haddaad raacdo hawadooda intuu kuu yimid cilmi ka dib, kama heshid xagga Eebe sokeeye jecel iyo Gargaare (midna).

وَلَنْ تَرْضٰى عَنْكَ الْيَهُودُ وَلَا النَّصٰرَىٰ حَتّٰى تَبِيعَ مِلَّتَهُمْ ۗ قُلْ اِنْ هٰدَىٰ اللّٰهُ فَمَا لَهْدٰى وَّلٰيْنِ اَتَّبَعْتَ اَقْوَامًا هُمْ بَعْدَ الَّذِيْ جَاءَكَ مِنَ الْعِلْمِ ۗ مَا لَكَ مِنَ اللّٰهِ مِنْ وَّلِيٍّ وَّلَا نَصِيْرٍ ﴿١٢٠﴾

121. kuwaan siinnay Kitaabka waxay u raacaan raacid Xaq ah (u akhriyaan) kuwaasina waxay rumeyn Quraanka,

الَّذِيْنَ اٰتَيْنَاهُمُ الْكِتٰبَ يَتْلُوْنَهُ حَقّٰٓقًا وَّلَاوَيْهٖ ؕ اُوْلٰٓئِكَ هُمُ الْمُفْسِدُوْنَ ﴿١٢١﴾

ciddii ka Gaalowdana Quraankase (ama Nabiga) waa cidda Khasaartay uun.

122. Banii Israa'iilow xusa Nicmadaydii aan idiinku Nicmeeyey iyo inaan idiinka fadilay adduunka (Waqtigiinii).

بَنِي إِسْرَائِيلَ اذْكُرُوا نِعْمَتِيَ الَّتِي أَنْعَمْتُ عَلَيْكُمْ وَأَنَّى فَضْلًا كَرِيمًا عَلَى الْعَالَمِينَ ﴿١٢٢﴾

123. ka dhawrsada maalintayna Nafna naf kale ka deeqaynin waxba, Furashana aan laga aqbalayn, Shafeecana ayan anfacayn oona loo gargaarayn.

وَاتَّقُوا يَوْمًا لَا تَجْزِي نَفْسٌ عَنْ نَفْسٍ شَيْئًا وَلَا يُقْبَلُ مِنْهَا عَدْلٌ وَلَا تَنْفَعُهَا شَفَاعَةٌ وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿١٢٣﴾

Nabiga Muxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebaa diray, waajibkiisana wuu gutay'chelu Naarkana wax laga weeydiinmaayo, tan kale Yuhuud iyo Nasaara iyo Gaalaba kaama raali noqdaan intaad karaac-did waxay rabaan, Hanuun iyo wanaagna waa midka Eebe, ciddii warkoodaraacdana wax Eebe ka soo haray oo u gargaari ma jiro, Dadkase Kitaabka rumaysan waxay si fiican u raacaan Kitaabkaas wayna rumeeyaan, ciddiise ka Gaalowda waa mid khasaartay. Quraankana wax badan yuu Eebe ku sheegay inuu u Nicmeeyey Banii Israa'iil markay Xaqa ku toosnaayeen, markayse xumaan sameeyeen waxay lakulmicijaabdarar, Cabdullaah Binu Maseud wuxuu sheegay in kuwa Quraanka u raaca si xaq ah ay yihiin kuwa wuxuu banneeyay raaca, wuxuu reebana kajooga, una akhrya sida Eebe u soo dajiyey. Al-Baqarah (119-123).

124. xusuusta marka Eebe ku imtixamay Nabi Ibraahim kalimooyin (ereyo) uuna dhameeyey, kuna yidhi waxaan kaaga yeeli Dadka Imaam, wuxuuna yidhi (Ibraahiim) Caruurtaydana (kayeel) (Eebe) wuxuu yidhi ballankaygaa (fiican) ma gaadho daalimiinta.

* وَإِذْ ابْتَلَىٰ إِبْرَاهِيمَ رَبُّهُ بِكَلِمَاتٍ فَأَتَمَّهُنَّ قَالَ إِنِّي جَاعِلُكَ لِلنَّاسِ إِمَامًا قَالَ وَمِنْ ذُرِّيَّتِي قَالَ لَا يَنَالُ عَهْدِي الظَّالِمِينَ ﴿١٢٤﴾

125. xusuuso markaan ka yeeley baydka (Kacbada) meel Dadku ku kulmo, iyo Nabadgalyo kana yeesha Maqaamka Ibraahiim meel lagu tukado, waxaan u waxyoonay Nabi Ibraahim iyo Ismaaciil inay u daahiriyaan baydkayaga kuwa dhawaafi, kuwa ku nagi, iyo kuwa Rukuuci ee sujuudi.

وَأِذْ جَعَلْنَا الْبَيْتَ مَثَابَةً لِّلنَّاسِ وَأَمْنَا وَانْتَخَذُوا مِن مَّقَامِ إِبْرَاهِيمَ مُصَلًّى وَعَهِدْنَا إِلَىٰ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْمَاعِيلَ أَنَّ طَهِّرَا بَيْتِيَ لِلطَّائِفِينَ وَالْقَائِمِينَ وَالرُّكَّعِ السُّجُودِ ﴿١٢٥﴾

126. xusuuso markuu yidhi (Nabi) Ibraahiim Eebow kayeel Magaaladan (Maka) aamin kuna Arzaaq Dadkeeda Midho kooda rumeeya Eebe iyo Maalinta dambe (Qiyaamada) (Eebe) wuxuu yidhi: iyo kan gaaloobaba waan u raaxayn in yar markaas waanu galin

وَإِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ رَبِّ اجْعَلْ هَذَا بَلَدًا آمِنًا وَارْزُقْ أَهْلَهُ مِنَ الثَّمَرَاتِ مَنْ آمَنَ مِنْهُم بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ قَالَ وَمَنْ كَفَرَ فَأُمْتِعْهُ قَلِيلًا ذُرِّيَّتُهُ ذُرِّيَّتُ الدَّارِ الْكَاذِبَةِ ﴿١٢٦﴾

Cadaabka Naarta meel la ahaadana iyadaa u xun.

127. xusuuso markuu kor yeelay Nabi Ibraahim Tiirarka Kacbada iyo Nabi Ismaaciil iyagoo leh Eebow naga aqbal adaa waxna maqla waxna oge.

وَأذِيعُوا بُرُوحَهُمْ فِي الْقَوَاعِدِ مِنَ الْبَيْتِ وَأَسْمِعُوا
رَبَّنَا تَقَبَّلْ مِنَّا إِنَّكَ أَنْتَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿١٢٧﴾

128. Eebow naga yeel kuwa kuu hogaansama, Faracanagana ka yeel Umad kuu hogaansanta, nana tusi camalkan-naga (Xajka) nagana toobad aqbal adaa toobad aqbal badane, naxariisba-danana ahe.

رَبَّنَا وَأَجْعَلْنَا مُسَلِّمِينَ لَكَ وَمِنْ دُرِّ رَبَّنَا نَاقَةٌ
مُسَلِّمَةٌ لَكَ وَأَرِنَا مَنَاسِكَنَا وَتُبْ عَلَيْنَا إِنَّكَ أَنْتَ
الْقَابِلُ الرَّحِيمُ ﴿١٢٨﴾

Nabi Ibraahim Eebaa imtixaamay'wuuna ku guulaystay Imtixaamki'wuxuu Eebe ka dhigay Imaam, isaga iyi Wiilkiisii Nabi Ismaaciil yaana dhisay Kacbada'Eebana way baryeen wuuna ka aqbalay baryadii reer Makaadna Eebe u baryeen inta xaqa raacda in Eebe Irzaaqo'Eebana wuu arzaaqi cidkasta'Gaaladana Aakharuuka'aarsan, waxaynakutusin Aayaduhu Waynidaiyo Sharafta kacbada iyo Magaalada Makaadee barakeysan. Al-Baqarah (124-128).

129. Eebow u soo bixi Rasuul ka mid ah oo u akhriya aayaadkaaga barana Kitaabka (Quraanka) iyo xigmada (sunaada Nabiga) oo nadiifiya adigaa adkaade, Falsame ahe.

رَبَّنَا وَأَنْعِثْ فِيهِمْ رَسُولًا مِنْهُمْ يَتْلُوا عَلَيْهِمْ
آيَاتِكَ وَيُعَلِّمُهُمُ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ
وَيُزَكِّيهِمْ إِنَّكَ أَنْتَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١٢٩﴾

130. yaa naca diinta Nabi Ibraahim ruux xumeeyey naftiisa mooyee, waana doorannay Nabi Ibraahiim, adduunyada, aakhirana wuxuu ka midnoqon kuwa suusuuban.

وَمَنْ يُرِغِبْ عَنْ مِلَّةِ إِبْرَاهِيمَ إِلَى مَن سِوَى اللَّهِ
فَإِنَّهُ يَصْطَفِيَنَّ فِي الدُّنْيَا وَإِنَّهُ فِي الْآخِرَةِ لَمِنَ
الصَّالِحِينَ ﴿١٣٠﴾

131. xusuuso markuu Eebe ku yidhi hogaansan oo uu yidhi waan u hogaansamay Eebaha Caalamka.

إِذْ قَالَ لَهُ رَبُّهُ أَسْمِعْ قَالَ أَسْمِعْتُ لِرَبِّ
الْعَالَمِينَ ﴿١٣١﴾

132. wuxuu u dardaarmay arintaas (Nabi) ibraahim Caruurtiisa, Nabi Yacquubna wuu u dardaarmay, wuxuuna yidhi Caruurtaydiyey Eebe wuxuu idiindoortay Diinta ee ha dhimanina idinkoon Muslim ahayn.

وَوَصَّى بِهَا إِبْرَاهِيمَ بَنِيهِ وَيَعْقُوبَ بَنِي إِدْرِيسَ
أَصْطَفَى لِكُلِّ أَهْلِ الْبَيْتِ وَالْآلِ الْأَنْبِيَاءِ
مُسَلِّمِينَ ﴿١٣٢﴾

waynida Xaramka iyo Kacbada iyo waxa kusoo arooray waxay ku qoran tahay Kutubaha Dheer dheer, tan kale waxay aayaduhu cadddeeyeen in Nabi Ibraahim eebe warsaday innu maka ka yeelo Magaalo aamin ah, oo Dadkeeda la arzuqo, waxaa kale oos warsaday Eebe in camalkooda la aqbal adaa iyo wiilkiisa Nabi Ismaaciil Muslimna laga yeelo iyo Caruurtooda, Camalkooda fiicanna la tusiyo, Nabi

Dadka ka mid ahna loo soo bixiyo (Nabiga Muxamed ah naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) si uu u baro xaqa'ugana leexiyo Xumaanta, saas darded Diinta Islaamka ah oo Diintii Nabi Ibraahim iyo Nabiyadii kale ma naco ruuxaan doqon aan wax garanayn ahayn mooyee, laguna dhaqmo laguna dhinto, Nabiguna wuxuu yidhi: Maka Eebaa xarrimay ee Dad ma xarrimin, cidna uma bannaana inuu Dhiig ku daadiyo, ama geedaheeda guro, waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

waxaa kale oo Nabigu yidhi: Anaa ugu dambeeya Nabiyada Eebe agtiisa isagoo Nabi Adamna Dhoobada ku dhex jiro, waxaana ahay baryadii Nabi Ibraahim iyo Bishaaradii Nabi Ciise, Hooyadayna way aragtay saasayna ahaayeen Nabiyada Hooyooyinkood, Waxaa wariyey Imaam Axmed. Waxaase haboon in wanaagoodii la raaco. Al-Baqarah (129-132).

133. miyaad joogteen (Yuhuuday) marka Geeridu u timid (Nabi) Yacquub markuu ku yidhi Caruurtiisa maxaad caabudaysaan Gadaashay, ayna dheheen waxaan caabudaynaa Eebahaaga iyo Eebaha Aabayowgaa Ibraahim, Ismaaciil iyo Isxaaq Eebe kaliya, isa-gaana u hogaansamaynaa.

134. taasina waa ummad taktay, waxayna Mudatay waxay kasbatay, idinkuna waxaad mudanaysaan waxaad kasbateen, laydina warsan maayo waxay Camalfalayeen.

135. waxay ku dhaheen Gaaladii Muslimiinta ama Yuhuud noqda ama Nasaara aad hanuunteene, waxaad dhahdaa mayee milladda (Diinta Nabi) Ibrahim yaan raacaynaa ee Xaqa u iishay, kamana mid ahayn Gaalada.

136. waxaad dhahdaan waxaan rumaynay Eebe iyo waxa naloo soo dajiyey iyo waxa lagu soo dajiyay Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub Iyo Caruurtoodii iyo wixii la siiyay (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Ciise iyo wixii laga siiyey Nabiyadii (Kale) xagga Eebohood kala gaynamayno dhexdooda, waxaana u hogaansamaynaa Eebe.

137. hadday u rumceyaan saad u rumayseen way hanuuneen, hadday jeedsadeenna waxay ku suganyihiin khilaaf, waxaana idinka kaafin Eebe isagaa wax maqla waxna oge.

أَمْ كُنْتُمْ شُهَدَاءَ إِذْ حَضَرَ يَعْقُوبَ الْمَوْتُ إِذْ قَالَ لِبَنِيهِ مَا تَعْبُدُونَ مِنْ بَعْدِي قَالُوا نَعْبُدُ إِلَهَكَ وَاللَّهُ آبَاءُكَ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْمَاعِيلَ وَإِسْحَاقَ إِلَهُهَا وَاحِدًا وَنَحْنُ لَهُ مُسْلِمُونَ ﴿١٣٣﴾

بَلْ كُنْتُمْ أُمَّةً قَدْ خَلَتْ لَهَا مَا كَسَبَتْ وَلكُمْ مَا كَسَبْتُمْ وَلَا تُسْئَلُونَ عَنْ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٣٤﴾

وَقَالُوا كُونُوا هُودًا أَوْ نَصَارَى تَهْتَدُوا قُلْ بَلْ مِلَّةَ إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿١٣٥﴾

قُلْ أُو۟لِيَٰٓئِۦنَّآ اٰمَنَّا بِاللّٰهِ وَمَاۤ اُنزِلَ اِلَيْنَا وَمَاۤ اُنزِلَ اِلَىٰٓ اِبْرٰهٖمَ وَاِسْمٰعٖلَ وَاِسْحٰقَ وَيَعْقُوبَ وَاَلٖٔ سَبْطِ وَاِنۡ اُو۟قِ مُوۡسٰى وَعِيسٰى وَمَاۤ اُو۟قِ النَّبٖٖٔنَ مِنْ رَّبِّهٖمۡ لَآ تَفَرَّقُۙ بَيْنَ اَحَدٍ مِّنْهُمۡ وَنَحْنُ لَهُۥ مُسْلِمُونَ ﴿١٣٦﴾

فَاِنَّۤ اٰمَنُوۡا بِوَجْهِ مَآءِۙ اَمْتَمَّ بِهِۦ فَقَدۡ اٰهْتَدُوۡا وَاِنۡ تَوَلَّوۡا فَاِنۡمَآ هُمۡ فِيۡ شِقَآقِۙ مَسٰٓكٖنٍ كٰهِنٍ كٰهِنٍ اللّٰهُ وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيْمُ ﴿١٣٧﴾

Eebe wuxuu halkan ka qisoon Nabi Yacquub iyo Caruurtiisii iyo wuxuu u dardaarmaay markuu dhimanayey iyo inay haysteen Milladdii awoowyadood (Nabi) Ibraahim, Ismaaciil iyo Isxaaq, hase ahaatee waxay Yuhuud iyo Nasaara sheegeen in hanuunkooda la raaco waa wax kama jiraan ee Diinta xaqa ah waa Diinta Nabi Ibraahim ee Diinta Islaamka ah, Muslimintuna waxay rumeysanyihiin Eebe, Quraanka wixii lagu soo dajiyay Nabi Ibraahim Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo Caruurtoodii iyo Wixii Nabi Muuse iyo Nabi Ciise lagu soo dejiyay mana kala qaybiyaan xaqa hadayse Gaaladu u rumeeyaan sida Muslimiinta waa hagaag, haddii kale waa inaan Xaqa ku toosnaano Eebaa ina kaafinaayee. Al-Baqarah (133-137).

138. ku sugnaada Diinta Eebe, yaa ka fiican Diinta Eebe (ma jiro) isagaana caabudaynaa.

صِبْغَةَ اللَّهِ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ صِبْغَةً
وَنَحْنُ لَهُ عَابِدُونَ ﴿١٣٨﴾

139. waxaad dhahdaa Nabiyoow ma waxaad igula doodaysaan Eebe isagoo Eebahanno iyo Eebihinna ah, anaguna Camalkanagu noo sugnaaday idinkuna Camalkiina, isagaana u kali yeelaynaa Diinta.

قُلْ أَتُحِبُّونَنَا فِي اللَّهِ وَهُوَ يُؤْتِنَا وَرَبُّكُمْ وَأَنَا
أَعْمَلُنَا وَالَكُمْ أَعْمَلُكُمْ وَنَحْنُ لَهُ
مُخْلِصُونَ ﴿١٣٩﴾

140. mise waxaad dhahaysaan Nabi Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo Caruurtii waxay ahaayeen Yuhuud ama Nasaara, waxaad dhahdaa ma idinkaa wax og Mise Eebe yaa ka dulmi badan ruux qariya marag agtiisa Eebe ku yeeshay, Eebana ma halmaamo waxaad falaysaan.

أَمْ تَقُولُونَ إِنَّ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْمَاعِيلَ وَإِسْحَاقَ
وَيَعْقُوبَ وَالْأَسْبَاطَ كَانُوا هُودًا أَوْ نَصَارَى
قُلْ أَنْتُمْ أَعْلَمُ أَمِ اللَّهُ وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ كَتَمَ
شَهَادَةَ عِنْدَهُ مِنَ اللَّهِ وَمَا اللَّهُ بِغَافِلٍ
عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١٤٠﴾

141. taasi waa umad tagtay, waxayna mudan waxay kasbatay idinkuna waxaad mudanaysaan waxaad kasbateen, laydin warsannamaayo waxay camalfalaysaan.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قَدْ خَلَقْنَا لَهُمَّا مَكْسَبَتِكُمْ فَلَا تَكْفُرُوا
بِهَا وَمَا لَكُمْ أَلَّا تُعْمَلُونَ بِهَا لِكُلِّ
حَدٍّ مِمَّا حَرَّامٌ عَلَيْكُمْ لِمَنِ الْمَالُ
الَّذِي كَسَبَتْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ لِمَنِ
كَسَبَتْ وَلَا تَكْفُرُوا بِمَا كَسَبْتُمْ
وَمَا لَكُمْ أَلَّا تُعْمَلُونَ بِهَا لِكُلِّ
حَدٍّ مِمَّا حَرَّامٌ عَلَيْكُمْ لِمَنِ
الْمَالُ الَّذِي كَسَبَتْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ
لِمَنِ كَسَبَتْ ﴿١٤١﴾

Ma aha xaalku sida Yuhuud iyo Nasaarada oo ah in la dhaho waxaa la sibqin ilmo, waxaana khayr iyo Wanaagba ah Diinta Islaamka ee ah Diinta Hanuunka iyo Toosnida, mana aha in dood xaq darro iyo Qallooc ah la dodo.

Nabi Ibraahim iyo Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo Caruurtuna ma ahayn Yuhuud iyo Nasaara midna, maxaayeeley cidna Eebe wax kama oga mana halmaamo waxa la camal fali, umad horeysay oo xaqa ku toosnayd in wax laga sheegana ma aha, maxaa yeeley cid walba waxay mudan waxay kasbatay wanaag iyo Xumaanba.

Qataade waxaa laga wariyey inuu Yidhi: Yuhuud iyo Nasaaraba waxay sibqiyaan (wax mariyaan) Caruurtooda, Sibqinta Eebana waa Diinta Islaamka wax ka fiican oo ka nadiifsanna ma jiro waana Diinta Nabi Nuux iyo Nabiyoowii ka dambeeyey. Al-Baqarah (138-141).

142. waxay dhihi kuwii maangaabta ahaa ee Dadka (Gaalada) ka mid ahaa

* سَيَقُولُ السُّفَهَاءُ مِنَ النَّاسِ مَا وَلَدَهُمْ عَن قِبَلِهِمْ

maxaa ka jeediyeey Muslimiinta Qibladay Qaabilijireen (Baytul Maqdis) waxaad dhahdaa Nabiyoow Qorrah ka soobax iyo u Dhacba Eebaa iska leh, wuxuuna ku hanuunin Ciduu doono Jidka toosan.

الَّتِي كَانُوا عَلَيْهَا قُلُوبَ اللَّهِ الْمَشْرِقُ وَالْمَغْرِبُ يَهْدِي
مَنْ يَشَاءُ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿١٤٢﴾

143. saasaan idinka dhignay ummad caadil (khayr ah) si aad marag ugu noqotaan Dadka, Rasuulkuna idiinku noqdo markhaati, mana aa naan yeelin Qibladii aad qaabilijirtay inay kala muuqato ruuxa Rasuulka raaca iyo kan dib u noqon (Gaalooobi) mooyee waana arrin kuweyn Dadka marka laga reebo kuwa Eebe hanuuniyey, Eebana ma dhumioyo Iimaankiinna (salaadiina) Eebana waa u Naxariisbadanyahay Dadka.

وَكَذَلِكَ جَعَلْنَاكُمْ أُمَّةً وَسَطًا لِتَكُونُوا شُهَدَاءَ
عَلَى النَّاسِ وَيَكُونَ الرَّسُولُ عَلَيْكُمْ شَهِيدًا وَمَا
جَعَلْنَا الْقِبْلَةَ الَّتِي كُنْتُمْ عَلَيْهَا إِلَّا لِمَنَعَنَا
الرَّسُولَ وَمَنْ يَنْقَلِبْ عَلَى عَقْبَيْهِ وَإِنْ كَانَتْ لَكِ
إِلَاحٌ عَلَى الَّذِينَ هَدَى اللَّهُ وَمَا كَانَ اللَّهُ لِيُضَيِّعَ
إِيمَانَكُمْ إِنَّ اللَّهَ بِالنَّاسِ لَرُءُوفٌ رَحِيمٌ ﴿١٤٣﴾

144. dhab ahaan yaan ugu jeednay gagadoonka Wajigaaga ee Samada, waxaana kuu jeedinaynaa Qiblad aad ka raali noqon, ee u jeedi Wajigaaga xagga Masjidka Xurmeysan, meelkastood Joogtaanna u jeediya Wajigiinna xagiisa, kuwa Kitaabka la siiyeyna waa ogyihiin in jeedintaas xaq Eebe tahay, Eebana ma halmaansana waxay Camal fal.

قَدْ دَرَى تَقَلُّبُ وَجْهِكَ فِي السَّمَاءِ فَلْيُوِّسِّنَاكَ قِبْلَةً
تَرْضَاهَا أَوَّلَ وَجْهِكَ وَجْهَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ
وَحَيْثُ مَا كُنْتُمْ فَوُجُوهُكُمْ شَطْرَهُ وَأَنْ
الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ لَيَعْلَمُونَ أَنَّهُ الْحَقُّ مِنْ رَبِّهِمْ
وَمَا اللَّهُ بِغَفِيلٍ عَمَّا يَعْمَلُونَ ﴿١٤٤﴾

Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu Qaabilijiray intii muddo ah markuu Tukan xagga Quddus, markii Eebe faray inuu Kacbada u jeedsado yaa kuwii maangaabta Dicaayad iyo war fureen, iyagoo is warsan waxa Nabiga jeediyeey 'Eebaase Xukunka leh, umadda Muslimka ahna ka dhigay marag caadil ah, siduu Nabiga uga yeelay maragga umadda, arrinta u jeedinta Qibladana uma fududa ruuxaan Mu'min ahayn Eebana hanuuniyey, Kuwii Qibladii hore u Tukadayna Eebe ma halleeyo Camalkooda, Eebana wuxuu daalacanayey ogaana jacaylka Nabiga in Kacbada loo jeediyo, inay arrintaasu xaqtahayna waxaa ogayd ciddii xaqa rabta.

Ibnu Cumar waxaa laga wariyey inuu yidhi: Dadkoo ku tukan quba Salaad Subax yuu ruux u yimid kuna yidhi Rasuulkii xalaa lagu soo dajiyey Quraan inuu Kacbada Qaabilo Shaam bayna u jeedeen. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Al-Baqarah (142-144).

145. hadaad ula timaado kuwa ehelu Kitaabka ah aayad kasta ma raacayaan Qibladaada adiguna ma raacaysid Qibladaada, qaarkoodna ma aha kan raaca Qiblada qaarka kale, hadaad

وَلَيْنَ اتَّبَعَتِ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ بِكُلِّ آيَةٍ
مَاتِيَعُوا قِبْلَتَكَ وَمَا أَنْتَ بِتَابِعٍ قِبْلَتَهُمْ
وَمَا بَعْضُهُمْ بِتَابِعٍ قِبْلَةَ بَعْضٍ وَلَئِنِ اتَّبَعْتَ

raacdo waxay jecelyihiin Gaaladu, inta cilmi kuu yimid (waxyiga Eebe) daba-deed, waxaad ka mid noqon daalimiinta.

146. kuwaan siinay Kitaabka waxay u yaqaanaan Nabiga (iyo xaquu la yimid) siday u yaqaanaan Caruurtooda, koox kamid ahna waxay qarinqa iyagoo og.

147. Xaqu wuxuu ka yimid xagga Eebahaa ee ha ka mid noqonin kuwa shakiya.

148. cidwalba waxay leedaahay jaho ay dhawrto (raacdana) ee u oratama Wanaaga, meelkastood ahaataanna Eebe wuu idin keeni (oo idin kulmin) dhammaantiin, Eebana wax walba wuu karaa.

Cidaan Xaqa Ebe rabin lama qancin karo waxkastoo loo keeno'sida xaq diidayaasha'ruuxa Mu'minka ahna waa inuusan ku kadsoomin Xumaantooda kana digtoonaadaa inuu Jidkooda raaco, Eebana markuu ku adkeeyey Nabiga xaalkaas waxay digniin u tahay ummadiisa, Gaaladuna way garan Xaqa iyo wanaagga iyo runnimada Nabiga, hase yeeshe waxay u diidi Xasad iyo Xumaan jacayl, maxaa yeeley Xaq cad wax la shakiyo ma aha, cidwalbase waxbay aaminsan tahay kuna socota, waase in Khayrka iyo wanaagga loo deg dego, Eebana Dadka wuu kulmin Qiyaamada si uu u kala bixiyo. Waxaa laga wariyey in Cumar ku yidhi Cabdullaahi Binu Salaam: Ma garan Nabiga Muxamed ah sidaad u garan Ilmahaaga markaasuu yidhi Haa wax ka badan'amiinkiiyaa ka soo dajin Cirka kuna soo dajin amiinka Dhulka waana aqoonsaday'Ilmahaygase ma ogi waxay fashay Hooyadiis. Al-Baqarah (145-148).

149. meelkastood u baxdo u jeedi Wajigaaga xagga Masjidka Xurmaysan, Xaqu xagga Eebahaa buu ka ahaaday Eebana Ma Mooga Waxaad Falaysaan.

150. meelkastood u baxdana jeedi Wajigaada Masjidka Xurmaysan xaggiisa, meelkastood joogtaanna u jeediya Wajiyadiinna xaggiisa, si ayna xujo ugu ahaan Dadka Korkiinna, kuwa Daalimiinta ah mooyee (ee gardarada ku socda) hana ka cabsanina ee aniga iga cabsada, waxaana idiin taamyeeeli (dhamayn) Nicmadayda si aad u hanuuntaan.

أَهْوَاءَهُمْ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَكَ مِنَ الْعِلْمِ إِنَّكَ إِذًا لَمِنَ الظَّالِمِينَ ﴿١٤٥﴾

الَّذِينَ آتَيْنَاهُمُ الْكِتَابَ يَعْرِفُونَهُ كَمَا يَعْرِفُونَ أَبْنَاءَهُمْ وَإِنَّ فَرِيقًا مِنْهُمْ لَيَكْتُمُونَ الْحَقَّ وَهُمْ يَعْمُونَ ﴿١٤٦﴾

الْحَقُّ مِنْ رَبِّكَ فَلَا تَكُونَ مِنَ الْمُكذِبِينَ ﴿١٤٧﴾

وَالِكُلِّ وُجْهَةٍ هُمْ مَوْلِيَاهَا فَاسْتَقِيمُوا إِلَى الْخَلْقِ إِنَّا مَّا تَكُونُوا يَاتُكُمْ إِلَهُكُمْ جَمِيعًا إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٤٨﴾

وَمِنْ حَيْثُ خَرَجْتَ فَوَلِّ وَجْهَكَ شَطْرَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَإِنَّهُ لِلْحَقِّ مِنْ رَبِّكَ وَمَا اللَّهُ بِغَفْلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١٤٩﴾

وَمِنْ حَيْثُ خَرَجْتَ فَوَلِّ وَجْهَكَ شَطْرَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَحَيْثُ مَا كُنْتُمْ فَوَلُّوا وُجُوهَكُمْ شَطْرَهُ لِئَلَّا يَكُونَ لِلنَّاسِ عَلَيْكُمْ حُجَّةٌ إِلَّا الَّذِينَ ظَلَمُوا مِنْهُمْ فَلَا تَحْشَوْهُمْ وَاخْشَوْنِي وَلَا تُرْسِدُوا بَعْثَكُمْ فَعَلَكُمْ تَهْتَكُونَ ﴿١٥٠﴾

151. (waan idiin Nicmeynay) sidaan idinku dirnay dhexdiina Rasuul idinka mid ah oo idinku akhriya Ayaadkana-ga, oo idin daahiriya, oo idin bara Kitaabka (Quraanka) iyo Sunada Nabiga, idinna bara waxaydaan aqoonin.

كَمَا أَرْسَلْنَا فِيكُمْ رَسُولًا مِّنكُمْ يَتْلُوا عَلَيْكُمْ آيَاتِنَا
وَيُزَكِّيكُمْ وَيُعَلِّمُكُمُ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ
وَيُعَلِّمُكُم مَّا تَرْتَكُونَ أَتَعْلَمُونَ ﴿١٥١﴾

152. ee I xusa aan idin ku Xusee (naxariis iyo dambi dhaaf) iguna maha-diya hana iga Gaalobina.

فَأَذْكُرُوا فِي آذَانِكُمْ وَأَشْكُرُوا لِي وَلَا
تَكْفُرُوا ﴿١٥٢﴾

Waa amar Saddexaad oo Alle Dadka Muslimiinta ah faray inay qaabilaan Masjidka Kacbada ee Xurmeysan, waxaana loo soo celceliyey waynida arrinta, waxaana lala hadlay Ciddii Kacbada u jeedda, iyo kii Maka jooga iyo kan Adduunka kale jooga, waana amar Waajib ah, Ciddii ka murantana ayan wax xujo ah lahayn, hase yeeshee Xaq diidayaashu way iska murmi Xujo la'aan 'waase in Eebe uun laga cabsado isagaa rasuulka inoo soo diray si uu inoo toosiyo 'Xaqana inoo baro' Xumaantana inooga leexiyo 'Xusida Eebe iyo Mahadiisuna waa in la badiyo, Eebana wuxuu yidhi: Hadaad kali igu Xusto waan ku xusi si kali ah, hadaad i xusto adoo Dad la joogana waxaan kugu xusi kulan ka Khayrbadan kiinna.

Nabigana wuxuu yidhi: Ruuxii Eebe u nicmeeyo Eebe wuxuu jecelyahay inay Nicmada raadkeedu ka muuqdaan Khalqigiisa.

waxaa wariyey Imaam Axmed. Al-Baqarah (149-152).

153. kuwa (Xaqa) rumeeyow kaalmays-ta Samir iyo Salaad, Eebe wuxuu la jiraa kuwa Samree.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا اسْتَعِينُوا بِالصَّبْرِ وَالصَّلَاةِ
إِنَّ اللَّهَ مَعَ الصَّابِرِينَ ﴿١٥٣﴾

154. hana ku dhihina kuwa lagu Dilo Jidka Eebe (Jahaadka) waa Dhinteen, saas ma aha ee waa noolyihiin, mase kaseysaan.

وَلَا تَقُولُوا لِمَن يُقْتَلُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ آمُوتٌ بَلْ أَحْيَاءٌ
وَلَكِن لَّا تَشْعُرُونَ ﴿١٥٤﴾

155. waxaan idin ku Imtixaanaynaa wax Cabsi ah iyo Gaajo, iyo Nusqaamin Xoolaha iyo Nafta iyo midhaha, ee u Bishaaree kuwa Samra.

وَلَنَبَلِّغَنَّكُمْ أَشْيَاءَ مِّنَ الْخَوْفِ وَالْجُوعِ وَنَقْصٍ مِّنَ
الْأَمْوَالِ وَالْأَنْفُسِ وَالشَّرَاتِ وَيُبَشِّرُ الصَّابِرِينَ ﴿١٥٥﴾

156. kuwaas markuu dhib ku dhoco yidhaahda Eebaa na leh isagaana u noqonaynaa.

الَّذِينَ إِذَا أَصَابْتَهُمُ مُصِيبَةٌ قَالُوا إِنَّا لِلَّهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ
رَاجِعُونَ ﴿١٥٦﴾

157. kuwaas waxaa korkooda ahaan Deeq Eebe iyo Naxariistiisa, waana kuwa hanuunsan.

أُولَئِكَ عَلَيْهِمْ صَلَوَاتٌ مِّن رَّبِّهِمْ وَرَحْمَةٌ
وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُهْتَدُونَ ﴿١٥٧﴾

158. Safo iyo Marwo waxay ka midyihiin Calaamooyinka (Wayneynta) Eebe ee ruuxii u Xajiya Baydka ama Cum-raysta wax ma saarra hadduu ku

*إِنَّ الصَّفَا وَالْمَرْوَةَ مِن شَعَائِرِ اللَّهِ فَمَنْ حَجَّ الْبَيْتَ
أَوْعَمَّرَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِ أَنْ يَطَّوَّفَ بِهِمَا وَمَن

Wareego Dhexdooda, ruuxa wax dheeraad ah la yimaadana Eebe wuu ku mahdin wuuna ogayahay.

تَطَوَّعَ خَيْرًا فَإِنَّ اللَّهَ شَاكِرٌ عَلِيمٌ ﴿١٥٨﴾

Samirka iyo Salaaduba way u kaalmeeyaan Dadka, waana in lagu dadaalo, tan kale Dadkii Jidka Eebe ee Jahaadka ah lagu dilay ma aha Dad dhintay waxayse ku noolyihiin Wanaag iyo Nolol aynaan kasayn, Adduunkuna waa Guri Imtixaan oy ku heli Cabsi, Gaajo, Xoolaha iyo Nafta iyo Midhaha oo nusqaama, waxaase loo bishaareeyey kuwa adkaysta oga inay adoomo eebe yihiin una noqon, waxayna mudan Naxariis iyo Wanaag, waana kuwa toosan. Safo iyo Marwo in la dawaafana waa Waajib cidii Xajinaysa ama Cumraysan, waxaa loo yidhi ruuxii dawaafa wax ma saarra waa in loo maleeyey inay tahay arrin soo jirtay, Xadiithna waxaa ku sugnaaday: Waxaa la yaab leh xaalka Mu'minka hadduu Khayr helo wuu ku mahdiyaa Khayrbayna u noqotaa, hadduu dhib ku dhacana wuu Samraa waxayna u noqotaa Khayr. Al-Baqarah (153-158).

159. Kuwa qariya waxaan soo dajinay oo aayaad ah iyo hanuun intaan dadka ugu caddaynay Kitaabka ka dib kuwaas Waxaa nacladi Eebe iyo Kuwa wax Nacalada (malaaigta iyo Mu'miniinta).

إِنَّ الَّذِينَ يَكْفُرُونَ مَا أَنْزَلْنَا مِنْ آيَاتِنَا وَآلِهَتِنَا يُهْدَىٰ مِنْ بَعْدِ مَا بَيَّنَّنَا لِنَاسٍ فِي السُّبُلِ أُولَٰئِكَ يُلَعْنُهُمُ اللَّهُ وَيَلْعَنُهُمُ اللَّعْنُونَ ﴿١٥٩﴾

160. Marka laga reebo kuwa toobad keena oo Wanaaga fala oo Xaqa caddeeya, kuwaas waan ka toobad aqbal, waxaana ahay toobad aqbal badane Naxariis badan.

إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا وَأَصْلَحُوا وَبَيَّنَّا فَاوَلِيكَ أُولَٰئِكَ عَلَيْهِمْ وَأَنَا التَّوَّابُ الرَّحِيمُ ﴿١٦٠﴾

161. Kuwii Gaaloobay oo ku dhintay gaalnimo Kuwaas waxaa korkooda ah nacaladda Eebe iyo Malaa'igta iyo Dadka dhammaan.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَأَمَّاوُا وَهُمْ كَفُورٌ أُولَٰئِكَ عَلَيْهِمْ لَعْنَةُ اللَّهِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالنَّاسِ أَجْمَعِينَ ﴿١٦١﴾

162. Waxayna Kuwaari dhexdeeda (naarta iyo nacaladda) lagamana fududeeyo xagooda cadaabka Loomana sugo.

خَلَّيْنِ فِيهَا لَا يُخَفَّفُ عَنْهُمُ الْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿١٦٢﴾

163. Macbuudkiinnu waa mid keliya, ku in La caabudaa ay xaq tahay ma jiro isaga mooyee, Waana naxariis guud iyo mid gaarba naxariiste.

وَاللَّهُ كَرِيمٌ وَاللَّهُ وَجِدٌ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الرَّحْمَنُ الرَّحِيمُ ﴿١٦٣﴾

164. Cirka abuurkiisa iyo dhulka iyo kala duwanaanta Habeenka iyo maalinka iyo doonta La socota badda wax anfaca dadka iyo waxa Eebe ka soo Dajiyay samada oo Biyo ah kuna nooleeyay Dhulka intuu dhintay ka dib, kuna fidiyay Dhulka Daabad kasta iyo gadgadoonka dabaysha iyo Daruu-

إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَآخِثَاتِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ وَالْفُلْكِ الَّتِي تَجْرِي فِي الْبَحْرِ بِمَا يَنْفَعُ النَّاسَ وَمَا أَنْزَلَ اللَّهُ مِنَ السَّمَاءِ مِنْ مَاءٍ فَأَحْيَا بِهِ الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا وَبَثَّ فِيهَا مِنْ كُلِّ دَابَّةٍ وَتَصْرِيفِ الرِّيْحِ وَالسَّحَابِ الْمُسَخَّرِ مِنَ السَّمَاءِ

raha loo sahlay Samada iyo Dhulka
dhexdiisa waxaa ugu sugan calaa-
mooyin kuwa wax kasi.

وَالْأَرْضِ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿١٦٤﴾

Xaqa oo la Qariyo waxay keentaa ciqaab Eebe iyo nacalad, Illeen Islaamku waa in wanaaga la is faro'xumaantana la is ka reebo, ciddii saas yeesha oo Xaqa cadaaysa oo wanaag fasha Eebe wuu ka toobad aqbalaa, Gaalnimo lagu Dhinto yayna ciqaab ku dhan tahay, Dadkana waxaa ugu filan calaamaad abuurka cirka, Dhulka, Habeenka, Dharaarta, Maraakiibta Bada socota, roobka, iyo Daruuraha xawaarayn cirka iyo Dhulka Dhexdooda' Abuudaa' uud wuxuu wariyay in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi: Ruuxii cilmi la Warsado oo Qariya Waxaa lagu xakamayn qiyaamada xakama naar ah. Al-Baqarah (159-164).

165. Dadka waxaa ka mid ah cid ka yeelan Eebe ka sokow wax lala caabudo una jecelyihiin say u jecelyihiin Eebe, kuwa rumeeyey xaqa yaa ka daran jecelkooda Eebe, hadday arkaan kuwa dulmiga falay Cadaabka (Aakharo) waxay ogaan lahaan lahaayeen in xoog dhamaantiis u sugnaaday Eebe, Eebana cadaabkiisu daranyahay.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يَتَّخِذُ مِنْ دُونِ اللَّهِ أَندَادًا يُحِبُّونَهُمْ
كَحُبِّ اللَّهِ وَالَّذِينَ آمَنُوا أَشَدُّ حُبًّا لِلَّهِ وَلَوْ يَرَى
الَّذِينَ ظَلَمُوا إِذْ يَسْرُونَ الْعَذَابَ أَنَّ الْقُوَّةَ لِلَّهِ
جَمِيعًا وَأَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعَذَابِ ﴿١٦٥﴾

166. markay iska bariyeelaan kuwii la raacay kuwii raacay, oy arkeen Cadaabka kalana go'ay xidhiidhkoodii.

إِذْ تَبَرَّأَ الَّذِينَ اتَّبَعُوا مِنَ الَّذِينَ اتَّبَعُوا وَأَوْا
الْعَذَابَ وَقَطَّعَتْ بِهِمُ الْأَسْبَابُ ﴿١٦٦﴾

167. waxayna dhaheen kuwii raacay haddii nala celiyo waan iska bariyeeli lahayn xaggooda say iska kaanna bariyeelen, saasuuna Eebe u tusiyaa camalkooda isagoo qoomamo ku noqon doona (maxay xumida u sameeyeen), kuwo naarta ka bixina ma ahan.

وَقَالَ الَّذِينَ اتَّبَعُوا لَوْ أَنَّا كُنَّا نَدْرِكُهُمْ
كَمَا تَبَرَّأُوا مِنَّا كَدَّرْنَا بِرَبِّهِمُ اللَّهُ أَعْمَالُهُمْ
حَسْرَتٍ عَلَيْهِمْ وَمَا هُمْ بِخَارِجِينَ مِنَ النَّارِ ﴿١٦٧﴾

168. Dadoow cuna waxa Dhulka ku sugan kiisa xalaasha fiican ah hana raacina Wadooyinka Sheydaanka illeen Cadaw cad buu idiinyahay.

يَأْتِيهَا النَّاسُ كَالْوَأْدِ فِي الْأَرْضِ حَلَلًا لَّطِيبًا وَلَا
تَتَّبِعُوا خُطُوتَ الشَّيْطَانِ إِنَّهُ لَكُمُ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿١٦٨﴾

169. wuxuuna idin fari uun xumaan iyo Macsiyo iyo inaad ku sheegtaan Eebe waxaydaan ogayn.

إِنَّمَا يَأْتِيكُمْ بِالسُّوءِ وَالْفَحْشَاءِ وَأَن تَقُولُوا عَلَى اللَّهِ
مَا لَا تَعْمَلُونَ ﴿١٦٩﴾

Eebaa jacaayl xaq ah mudan' mana haboona in Sida Eebe wax kale loo jeclaa, Qiyaamadana way iska bariyeeli Madaxdii kuway ku hogaaminayeen Xumaanta, xidhiidh koodiina wuu go'i, Calaacal iyo qoomamana wax matarayso iyo yaa i celiya aan iska bariyeelle say isaga kaanno bariyeelen, Dadkana

waa inay xalaasha cunaan'waxa Shaydaanku farina ayan raacin illeen waa cadaw Xumaan farayee, waxaa sugnaatay in Sacad Bini abii Waqaas ku yidhi Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Eebe ii bari inuu Ducadayda aqbal, markaasuu ku yidhi Cunadaadu Xalaal ha noqoto Ducaadaada waa la aqbaliye. Al-Baqarah (165-169).

170. marka lagu dhaho Gaalada raaca wuxuu soo dajiyey Eebe, waxay dhihi saas ma aha ee waxaanu raaci waxaan ka hellay Aabayowganno (oo caabudi) oo haday yihiin Aabayowgood kuwaan wax kasayn Hanuunsanayna (miyey raaci).

وَإِذْ قِيلَ لَهُمُ اتَّبِعُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ قَالُوا بَلْ نَتَّبِعُ مَا
أَلْفَيْتَنَا عَلَيْهِ ءَأَبَاءَهُنَّ أَمْ لَوْ كَانُوا أَبَاءَهُمْ لَوْلَا
يَعْقِلُونَ سَيِّئًا وَلَا يَهْتَدُونَ ﴿١٧٠﴾

171. waxay la midyihiin kuwii Gaaloo-bay mid u dhawaaqay (Heesi) waxaan wax maqlayn, kasayna Qaylada iyo Dhawaaqa mooyee, waxna ma maqlaan mana hadlaan waxna ma arkaan, waxna ma kasaan.

وَمَثَلِ الَّذِينَ كَفَرُوا كَمَثَلِ الَّذِي يَتَّقُ يَمَآلَا
يَسْمَعُ إِذْ دُعَاةَ وَنِدَاءَ صُمُّ بِكُمْ عَمَى فَهْمٌ
لَا يَعْقِلُونَ ﴿١٧١﴾

172. kuwa Xaqa rumeeyow wax ka Cuna wanaagaan idinku arzuqnay, kuna mahdiya Eebe hadaad tiihin kuwo isaga Caabudi.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا كُنْ لَوْ أَنَّ مِنْ طَائِفَةٍ مَأ
رَدَقَتُمْ وَأَشْكُرُوا لِلَّهِ إِنْ كُنْتُمْ إِيَّاهُ
تَعْبُدُونَ ﴿١٧٢﴾

173. wuxuu uun idinka reebay Bakhtiga, Dhiigga, Hilibka Doofaarka iyo wixii Eebbe Magiciisa waxaan ahayn lagu gawraco, ruuxiise aad ugu dhibbaatooda (xalaalna aan heleynin) oon xadgudbin dulmina galin korkiisa dambi masaarra (inuu) wax ka cuno Eebena waa dambi dhaafbadane Naxariisba-dan.

إِنَّمَا حَرَّمَ عَلَيْكُمُ الْمَيْتَةَ وَالذَّمَّ وَالشَّحْمَ
الْخِنْزِيرَ وَمَا ءَهْلَ بِهِ لَعْنَةُ اللَّهِ فَمَنْ أَضْطَرَّ غَيْرَ بَآغٍ
وَلَا عَادٍ فَلَا إِثْمَ عَلَيْهِ إِنْ أَتَى اللَّهَ عَفْوًا وَرَجِيمًا ﴿١٧٣﴾

Xaqa in la raaco yaa habboon ee ma aha in aabbe iyo Cidkale midna xumaan lagu raaco, oo lala mid noqdo Xoolo loo Heesi oo kale oo Xaqdiid la noqdo, Eebana waxbuu reebay in la cuno-waxna wuu xalaaleeyey, ee waa in la cuno xalaasha laguna mahadiyo Eebe, lagana fogaado Bakhtiga, Doofaarka, Dhiigga waxaan Magaca Eebe kaliya lagu gawricin, dhibaato iyo Baahise waa meesheeda Cidaan xad gudbin, Xadiithna waxaa ku sugnaaday Eebe waa wanaagsane'waxaan Wanaag ahayna ma aqbal wuxuuna faray Mu'miniinta wuxuufaray Rasuuladii... Al-Baqarah (170-173).

174. kuwa qariya waxa Eebe soo dajiyey oo Kitaabka ah (Quraanka) kuna gata lacag yar kuwaasi kuma cunayaan (ma galinayaan) Calooshooda waxaan Naar

إِنَّ الَّذِينَ يَكْتُمُونَ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ مِنْ الْكِتَابِ
وَإِسْتَرَوْهُ بِهِ ثَمَنًا قَلِيلًا أُولَئِكَ مَا يَأْكُلُونَ فِي

ahayn, lamana hadlo Eebe Maalinta Qiyaame mana daahiriyo waxayna Mudan Cadaab daran.

175. kuwaasi waa kuwa ku gatay baadida Hanuun, Cadaabna dambidhaafid maxaa uga adkaysi badan Naarta.

176. arrintaas waxaa ugu wacan in Allaah xaq nimo la soo dejiyey Kitaabka kuwii iskudiiday kitaabkana waxay ku suganyihiin khilaaf Fog.

177. Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan Qorax ka soo bax iyo Qorax u dhac laakiin sama fale waa ruuxii rumeeya Eebe, Qiyaame Malaa'igta, Kitaabka (kutubta Alle), Nabiyada, oo siiya Xoolaha isagoo jecel Qaraabada, Agoonta, Masaakiinta, Masaafirka, kuwa baryootama, Fakin qoor, oogana Salaadda, bixiyana Zakada, oofiyana ballankooda, markay ballamaan, Samra (adkaystana) Waqtiga saboolnimada, Jirrada iyo Dagaalka, kuwaasina waa kuwa ku runsheegay Iimaankooda waana kuwa dhawrsada.

Xaqoo la qariyo ama si xun loo sheego waa arrin daran oo Eebe ugu goodiyey Ciddii fasha Cigaab daran iyo Cadaab, maxaa yeelay Xaqii bay ku gateen adduunyo, hanuunkii iyo Dambidhaafkiina Baadi iyo Cadaab, marse hadday Khilaaf iyo Xaq diid ku suganyihiin ha u darbaadeen Cadaab hadday u adkeysan, Sama falkuna ma aha istustay iyo Wajigoo la jeediyo, waase in xaq dhammaantiis la rumeeyo, Dadkana loo Naxariisto 'Cibaadadana la badiyo'Dhibka iyo Jahaadka iyo Jiradana loo adkeysto iyadoo lagu dadaali sidii laysaga fududayn lahaa, kuwaa saas fala waa kuwa Xumaanta ka Dhawrsaday.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Sadaqo waxaa u fican inaad bixiso adoo fayow oo ku adag bixinta, yididiilana Hodontinimo, Waxaa wariyey Xaakim. Al-Baqarah (174-177).

178. kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyey Qisaasta Dadka la dilo, xurta xurbaa loo qisaasan, Adoonkana addoon, Haweenyada Haweeney, (aayadda maa'ida waxay caddeysay in ragga iyo haweenka la isu qisaasayo) ruuxiise looga cafiyeey

بُطُونِهِمْ إِلَّا النَّارَ وَلَا يَكْتُمُهُمُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَلَا يُرْكِبُهَا وَاللَّهُ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٥﴾
أُولَئِكَ الَّذِينَ أَشْرُوا الضَّلَالَةَ بِالْهَدَىٰ
وَالْعَذَابَ بِالْمَغْفِرَةِ فَمَا أَصْبَرَهُمْ
عَلَى النَّارِ ﴿٧٥﴾

ذَٰلِكَ بِأَنَّ اللَّهَ نَزَّلَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ وَإِنَّ الَّذِينَ
اخْتَلَفُوا فِي الْكِتَابِ لَفِي شِقَاقٍ بَعِيدٍ ﴿٧٦﴾

﴿ لَيْسَ الْبِرَّ أَنْ تُولُوا وَجُوهَكُمْ قِبَلَ الْمَشْرِقِ
وَالْمَغْرِبِ وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ ءَامَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ
الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالرَّسُولِ وَءَاتَى
الْمَالَ عَلَىٰ حُبِّهِ. ذَوِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسْكِينِ وَآبَانَ
السَّبِيلِ وَالسَّالِفِينَ وَفِي الرِّقَابِ وَأَقَامَ الصَّلَاةَ
وَوَاتَى الزَّكَاةَ وَالْمُؤْتُونَ بِعَهْدِهِمْ إِذَا عَاهَدُوا
وَالصَّابِرِينَ فِي الْبَأْسَاءِ وَالصَّرَآءِ وَحِينَ الْبَأْسِ أُولَئِكَ
الَّذِينَ صَدَقُوا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُتَّقُونَ ﴾ ﴿٧٧﴾

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الْقِصَاصُ فِي الْقَتْلِ
الْحَرْبِ بِالْحَرْبِ وَالْعَبْدَ بِالْعَبْدِ وَالْأُنثَىٰ بِالْأُنثَىٰ فَمَنْ عُفِيَ
لَهُ مِنْ أَحْيَاهُ سِئًا فَلْيَتَّبِعْ بِالْمَعْرُوفِ وَأَدَّاهُ إِلَىٰ
يَا حَسْبَ ذَٰلِكَ تَخْفِيفٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَرَحْمَةٌ فَمَنْ

Walaalkiis (xaggiisa) wax, waxaa saaran (kii qisaaska cafiyay) inuu si fiican u raaco isna Si fiican Loogu gudo, taasina waa fudayd xagga Eebe iyo naxariis, ruuxiise xadgudba intaas ka dib wuxuu mudan Cadaab daran.

179. waxaa idinku sugan Qisaasta nolol Dadka wax garadka ahow waxaadna mudantihii inaad dhawrsataan.

180. waxaa laydinku waajibiyey markaad Dhimanaysaan hadaad ka tagaysaan Xoolo dardaaranka Waalidaynka iyo Qaraabada si wanaagsan, Xaq bayna ku tahay kuwa dhawrsada.

181. ruuxiise badala dardaaranka intuu maqlay ka dib dambigu wuxuu saaranyahay uun kuwa wax badala, Eebana waa maqle og.

182. ruuxii uga cabsada dardaarme iilasho ama dambi oo hagaajiya dhexdoda, korkiisa danbi masaara, Eebana waa dambi dhaafbadane naxariis badan.

Eebe wuxuu soo dajiyay sharci wanaag badan si loogu dhaqmo. Hasa yeeshee dadku iskumid ma aha'qaar waxay kudhaqmi sharcigaas'qaarna in xoog iyo toosin la toosiyo mooyee ma hagaagaan saas darteed ciddii cid kale si gardara ah u disha waa in iyana la dilaa si nabad iyo nolol Loo helo hadii layska cafiyo si heshiis ah waa in si fiican laysu xaqmariyaa waa naxariis Eebe. tan kale waa in ruuxu geeri ka hor xuquuqda ku cadeeyaa dardaaran. si caddaalad markhaatiguna ka run sheegaa'waxna badalin wixii gaf ahna saxaa isgoon xumaan iyo danbi galin. Al-Baqarah (178-182).

183. kuwa xaqa rumeeyow waxaa Laydinku wajibiyay Soonka sidii loogu waajibiyey kuwii idinka horreeyey si aad u dhawrsataan.

184. waa Maalmo tirsan ee ruuxii idinka mid ah oo buka ama Safar ah waxaa korkiisa ah ayaamo kale (soonkood) kuwa uu dhibina waxay bixin "quudin" Miskiin, ruuxii badsada (Khayrkana) saasaa u fiican, inaad Soontaan yaana idiin khayrbadan hadaad tihiin kuwo wax og.

أَعْتَدْنَا بَعْدَ ذَلِكَ فَعَلَهُ. عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٧٩﴾

وَلَكُمْ فِي الْقِصَاصِ حَيَوةٌ يَا أُولِي الْأَلْبَابِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٨٠﴾

كُتِبَ عَلَيْكُمُ إِذَا ضَرَأْتُمْ أَكْثَرَ مِنَ الْمَوْتِ أَنْ تَرَكُوا خَيْرًا الْأَوْصِيَّةَ لِلَّذِينَ وَالَاقْرَبِينَ بِالْمَعْرُوفِ حَقًّا عَلَى الْمُنْفِقِينَ ﴿١٨١﴾

فَمَنْ بَدَلَهُ بَعْدَ مَا سَمِعَهُ فَأَنَّمَا إِنَّمُهُ عَلَى الَّذِينَ يُبَدِّلُونَهُ إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٨٢﴾

فَمَنْ خَافَ مِنْ مَوْصٍ جَنَفًا أَوْ إِثْمًا فَأَصْلَحَ بَيْنَهُمْ فَلَا إِثْمَ عَلَيْهِ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٨٣﴾

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الضَّيْمُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٨٤﴾

أَيُّهَا مَاعِدُونَ أَنْتُمْ قَاتِلْتُمْ مِنْكُمْ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّةٌ مِنْ أَيَّامٍ أُخَرَ وَعَلَى الَّذِينَ يُطِيقُونَهُ فِدْيَةٌ طَعَامٌ مِسْكِينٍ فَمَنْ تَطَوَّعَ خَيْرًا فَهُوَ خَيْرٌ لَهُ وَإِنْ أَنْتُمْ مَوْأخِرًا لَكُمْ مِنْهُ لَنْ نَسْأَلَكُمْ عَنْهُ تَعْلَمُونَ ﴿١٨٥﴾

185. waa bisha Soon ee la soo dajiyey dhexdeeda Quraanka, isagoo hanuun Dadka u ah, iyo caddayn hanuun iyo kala bixin (xaqa iyo baadhilka) ee ruuxii jooga (nagi) ha Soomo, ruuxiise buka ama Safar ah waxaa saaran maalmo kale, wuxuu idinla dooni Eebe fudayd ee idin lama doonayo culays, waana inaad dhamaystirtaan tirada wayneysaanna Eebe wuxuu idinku hanuuniyey, waxaadna u dhawdhiin, mudantihiin, inaad mahadisaan Eebe.

شَهْرٍ مَّصَانٍ الَّذِي أَنْزَلَ فِيهِ الْقُرْآنَ
هُدًى لِلنَّاسِ وَيُبَيِّنَاتٍ مِّنَ الْهُدَىٰ وَالْفُرْقَانَ فَمَن
شَهِدَ مِنْكُمُ الشَّهْرَ فَلْيَصُمْهُ وَمَن كَانَ
مَرِيضًا أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ فَعِدَّةٌ مِّنْ أَيَّامٍ أُخَرَ يُرِيدُ اللَّهُ
بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ
وَلِتُكْمِلُوا الْعِدَّةَ وَلِتُكَبِّرُوا اللَّهَ عَلَىٰ مَا
هَدَاكُمْ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٨٥﴾

Tiirarka waaweyn ee Islaamaka waxaa ka mid ah Soonka oo Eebe waajibiyey siduu umadihii hore ugu waajibiyey si xumaanta looga dhawrsado waana Maalmo tirsan oo Soddomeeye ama wax kayar ah, ciddii kartana waa ku waajib oo qaangaadh ah oo Cudur iyo Safar midna hayn, Soonku waa Bishii Quraanka oo hanuun iyo caddayno ah la soo dajiyay. Eebana dhib inalama doonayo ee fudayd buu inala rabaa iyo inaan dhamayno soonka, Eebana waynayno, kuna mahdino hanuunkiisa. Rasuulku wuxuu yidhi: (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ruuxii u sooma (Bisha) soon rumeyn Eebe iyo ajri kasab waxaa loo dhaafaa wuxuu hor marsaday oo dambi ah. Tan kale wuxuu ku tusin soonku sinnaan iyo cadaalad iyo in laysu naxariisto. Al-Baqarah (183-185).

186. hadday ku warsadaan Nabiyoow addoomadu xagayga anigu waan dhawhay waana ajiibaa (aqbalaa) baryada markay i baryaan, ee ha i maqleen iyaguna hana i rumeeyeen si ay u hanuunaan

وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِي عَنِّي فَإِنِّي قَرِيبٌ أُجِيبُ
دَعْوَةَ الدَّاعِ إِذَا دَعَانِ فَلْيَسْتَجِيبُوا لِي
وَلْيُؤْمِنُوا بِي لَعَلَّهُمْ يَرْشُدُونَ ﴿١٨٦﴾

187. waxaa laydiin banneeyey inaad Habeenka Soonka is aragtaan Haweenka, maxaayeelay dhar (asturaad bay) idiinyihiin, idinkuna dhar (asturaadbaad) u tihiin, Eebana wuxuu ogaaday inaad Khayaamayseen Naftiinna. Wuuna idinka toobad aqbalay idinna cafiyey ee hadda u taga Haweenkiinna kana doona waxa Eebe idiinku Qoray, Cuna oo Cabbana intuu ka muuqdo liilanka cadi (waagu) kan madow Aroortii, dhammeeyana Soonka tan iyo Habeenka hana u tagina Haweenka idinkoo ku nagi Masaajidda taasina waa xuduudda (Soohdinta) Eebe ee haw dhawaanina, saasuuna ugu Caddayn Eebe aayaadkii-

أَجَلٌ لَّكُمْ آيَاتِهِ الرِّفْقَ إِلَىٰ
نِسَائِكُمْ هُنَّ لِيَابِسُ لَكُمْ وَأَنْتُمْ لِيَابِسُ لَهُنَّ
عَلِمَ اللَّهُ أَنَّكُمْ كُنْتُمْ تَخْتَانُونَ أَنْفُسَكُمْ
فَتَابَ عَلَيْكُمْ وَعَفَا عَنْكُمْ فَاتَّقِنَ بُشْرُوهُنَّ
وَابْتَغُوا مَا كَتَبَ اللَّهُ لَكُمْ وَكُلُوا وَاشْرَبُوا
حَتَّىٰ يَبْتِئَ لَكُمْ الْخَبِيثَ الْأَبْيَضَ مِنَ الْخَبِيثِ
الْأَسْوَدِ مِنَ الْفَجْرِ ثُمَّ أَتَمُوا الصِّيَامَ إِلَىٰ الْآيَاتِ
وَلَا تُبَشِّرُوهُنَّ وَأَنْتُمْ عَاكِفُونَ فِي الْمَسَاجِدِ تِلْكَ
حُدُودُ اللَّهِ فَلَا تَقْرُبُوهَا كَذَلِكَ يَبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ
لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿١٨٧﴾

sa Dadka si ay u dhawrsadaan.

188. hana ku Cunina Xoolihiinna dhexdiinna si baadhil (Xaq darri ah) idinkoo u dhiibi (Laaluush) Xukaamta si aad ugu cuntaan qayb ka mid ah Xoolaha Dadk si xaaraan ah idinkoo og.

وَلَا تَأْكُلُوا أَمْوَالَكُمْ بَيْنَكُمْ بِالْبُطْلِ
وَتُدْءُوا بِهَا إِلَى الْكُفَّارِ لِتَأْكُلُوا فَرِيقًا مِّنْ
أَمْوَالِ النَّاسِ بِالْإِثْمِ وَأَنْتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١٨٨﴾

Eebeheen waa inoo dhawyahay wuuna maqli ducada iyo baryada addoomadiisa Mu'iniinta ah, wuuna aqbalaa, ee waa in iyaguna Eebehood adeecaan si dhab ahna u caabudaan, isagana baryaan, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Eebe waa ka xishoodaa in addoon fidiyey Gacmihiisa isagoo baryi inuu hoojiyo, Tan kale Soonka Habeenkii ma reebna inay is arkaan Laba is qabta, Maalintiise way reebantahay Bisha Soon inay is hunguriyeyyaan, waxaa kaloo la reebay inay is arkaan iyagoo Masaajidda ku nagi, waxaasi waa xuduudda Eebe waana inaan loo dhawaan. Allana wuu u caddeyn dadka, aaynadiiisa, doonis uu doonayo inay dhowrsadaan darteed.

Xoolaha Dadka kalana waa inaan xaq darro iyo Madaxda oo lala kaashado lagu Cunin, waana reebantahay in lagu cuno Laaluush, Khayaamo, Been iyo Wadda kasta oo Xaaraan ah iyadoo la ogyahay. Nabigaa yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Macnahaas.

Al-Baqarah (186-188).

189. waxay ku warsan Nabiyow Bilaha ee waxaad dhahdaa waqtiyayn (mud-dayn) bay u tahay Dadka iyo Xajka, mana aha Samo falku inaad ugaga timaadaan Guryaha xagga dhabarka ee sama fale waa ruuxii dhawrsada, ugagana imaadda Guryaha Albaabada, kana dhawrsada Eebe waxaad u dhawdhihin inaad Liibaantaane.

﴿يَسْأَلُونَكَ عَنِ الْأَهْلِ قُلْ هِيَ مَوَاقِيْتُ لِلنَّاسِ
وَالْحُجَّجِ وَلَيْسَ الْبِرُّ بِأَنْ تَأْتُوا الْبُيُوتَ مِنْ ظُهُورِهَا
وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنِ اتَّقَى وَأَتُوا الْبُيُوتَ مِنْ
أَبْوَابِهَا وَأَقْرَبُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٨٩﴾

190. kula dagaallama Jidka Eebe kuwa idinla daggalama, hana xadgudbina Eebe ma jecla kuwa xadgudbee.

وَقَاتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ الَّذِينَ يُقْتُلُونَكُمْ وَلَا
تَعْتَدُوا إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْمُعْتَدِينَ ﴿١٩٠﴾
وَأَقْتُلُوا هُرُوحًا قَتَلْتُمْ مِنْهُمْ وَأَخْرَجْتُمُوهَا مِنْ
أَحْسَنِ أَهْلِهَا مِنْهَا وَلَا تَقْتُلُوا هُرُوحًا قَتَلْتُمْ مِنْهَا
وَأَقْتُلُوا هُرُوحًا قَتَلْتُمْ مِنْهَا وَلَا تَقْتُلُوا هُرُوحًا
قَتَلْتُمْ مِنْهَا وَلَا تَقْتُلُوا هُرُوحًا قَتَلْتُمْ مِنْهَا
كَيْفَ تَقْتُلُونَ هُرُوحًا قَتَلْتُمْ مِنْهَا كَذَلِكَ
حَزَّاءُ الْكَلْبِيِّينَ ﴿١٩١﴾

191. ku dila meeshaad ka heshaanba, kana bixiya meeshey idin ka bixiyeen, Gaalnimaa ka daran Dilka, ha kula dagaalamina Masaajidka Xurmaysan agtiisa intay idinkula dagaalaman Dhexdiisa, haddayse idinkula dagaalaan la dagaalama, saasaa abaalka Gaalada ahe.

192. haddayse reebtoomaan Eebe waa dhaafidbadane naxariis badan.

فَإِنْ أَنْتُمْ هُنَا فَإِنَّ اللَّهَ عَفْوٌ رَّحِيمٌ ﴿١٩٢﴾

193. la dagaallama intaan la helin Gaalnimo, oo Diintu u ahaan Eebe, hadday reebtoomaan lalama Collaytamo cidaan xadgudbayn.

وَقَاتِلُوا هُرُوحًا حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ لِلدِّينِ لِلَّهِ فَإِنْ
أَنَّهْمُ أَفْلَاحٌ دُونَ الْإِعْلَى الظَّالِمِينَ ﴿١٩٣﴾

Bishu waa calaamaadka Eebe lagu aqoonsado, Soonku iyo Khayr badan'samo falla ma aha in guryaha dhabarka looga yimaado sidii Jaahilintii, ee sama fal waa dhawrsanaa, ee uga imaadaa Guryaha Albaabadooda'Eebana ka dhawrsada si aad u liibaantaan, kulana dirira Jidka Eebe kuwa idinkula dirira, hana xadgudbina Eebe ma jecla kuwa xadgudba, lana dirira meeshaad ka heshaanba, Cadowga Gaalada, kana bixiya meeshay idinka bixiyeen, Gaalnimadaa ka daran Dilkee'hana kula dagaalamina Masaajidka Xurmaysan agtisa intay idinkala dagaalaman dhexdiisa, haddayse idinkula dagaalaman la dagaalama'saasaana abaalka Gaalada ahe, haddayse joogsadaan Eebe waa dambi dhaafbadane Naxariis badan, dagaalama intaan gaalnimo iyo Xumaan laga helin Dhulka 'Diintuna Eebe u ahaato, hadday joogsadaan waxaan daalim ahayn lalama collaytamo, ruuxii u dagaalama in kalimada Eebe (Islaamku) sareeyo unbaa Jidka Eebe ku toosan.

waa Xadiith Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Al-Baqarah (189-193).

194. Bisha Xurmaysan (dagaalkeeda) waxaa laga horgayn bisha Xurmaysan, waxyaalaha xurmaysanna Qisaasbaa ah, ee ciddii idinku xadgudubta ku xadgudba "ku abaal mariya" intuu idinku xadgudbay wax la eg, Allana ka dhawrsada, ogaadana in Eebe la jiro kuwa dhawrsada.

الشَّهْرُ الْحَرَامَ بِالشَّهْرِ الْحَرَامِ وَالْحُرُمَاتِ قِصَاصٌ مِّمَّنْ
أَعْتَدَى عَلَيْكَ فَأَعْتَدُوا عَلَيْهِ بِمِثْلِ مَا أَعْتَدَى عَلَيْكَ
وَاتَّقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُتَّقِينَ ﴿١٩٤﴾

195. ku nafaqeeya (ku bixiya wax) Jidka Eebe, hana ku tuurina Gacmihiina halaag (waxbixin la'aan) wanaagna fala, Eebe wuxuu jecelyahay kuwa wanaagga fala.

وَأَنْفِقُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلَا تُلْقُوا بِأَيْدِيكُمْ إِلَى التَّهْلُكَةِ
وَاحْسِنُوا إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ ﴿١٩٥﴾

196. dhamaystirana Xajka iyo Cumrada, haddii laydinka horjoogsadana waxaa idin saaran wixii fududaada oo hadya ah (inaad gawracdaan) hana xiirina madaxiina intay ka gaadhi hadyada meesheeda, ruuxii idinka mid ah oo buko ama wax dhibi madaxa kaga jiraan ama kaga yaallaan, waxaa saaran Fidyo (Furasho) Soon ah, ama Sadaqo, ama gawrac, markaad aamin noqotaan ruuxii cumro iyo Xajka ku raaxaysta (kulmiya) waxaa saaran wixii Fududaada oo hadya ah (gawrac), ruuxaanse helin ha ku Soomo Saddex maalmood Xajka iyo todoba markuu ku noqdo gurigiisii, taasina waa toban buuxda, waase ruuxaan deganayn Masaajidka la xurmeeyey (Maka), kadhawrsada Eebe, ogaadana in Eebe yahay kay darantahay Cigaabtiisu.

وَأَتِمُّوا الْحَجَّ وَالْعُمْرَةَ لِلَّهِ فَإِنْ أُخْصِرْتُمْ فَمَا اسْتَيْسَرَ مِنَ
الْهَدْيِ وَلَا تَخْلُقُوا زُرًّا وَسَكَرًا حَتَّى تَبْلُغَ الْهَدْيَ مَحَلَّهُ فَمَنْ كَانَ
مِنْكُمْ مَرِيضًا أَوْ بِهِ أذىٌ مِنْ رَأْسِهِ فَفِدْيَةٌ مِنْ صِيَامٍ
أَوْ صَدَقَةٍ أَوْ نُسُكٍ فَإِذَا أَمِنْتُمْ فَمَنْ تَمَعَ بِالْعُمْرَةِ إِلَى الْحَجِّ
فَمَا اسْتَيْسَرَ مِنَ الْهَدْيِ فَمَنْ لَمْ يَجِدْ فِصْيَامَ ثَلَاثَةِ أَيَّامٍ
فِي الْحَجِّ وَسَعَةً إِذَا رَجَعْتُمْ تِلْكَ عَشْرَةٌ كَامِلَةٌ ذَلِكَ لِمَنْ لَمْ يَكُنْ
أَهْلًا، حَاضِرِي الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَاتَّقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا
أَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿١٩٦﴾

Dagaalka xaq darro waqti walba waa reebanyahay Bisha xurmada lehna waa ka sii daranyahay'hadday Gaaladu inalala dagaalamaan waa inaan iska celinaa, ciddii Muslimka ku xadgudubtana waa in la abaalmaryo, iyagoon lagu tacadiyeyn Eebana laga dhawrsan, lana ogaan in Eebe la jiro kuwa dhawrsada, waana in wax la bixiyo oon bakhaylnimo laysku halaagin, Xajka iyo Cumradana si fican loo guto'haddiise lagu diido intaad xarmatay waxaad gawrici Xoolo madaxana lama xiiro inta hadiyadu meesheeda ka gaadhi'ruuxiise madaxa boogo dhibi ama injiri kaga jirto wuu xiiri, oo Fidyana samayn, ruuxiise raaxeeysta Cumrada iyo Xajka dhexdooda waxaa laga rabaa wixii u fududaada oo hadya ah'hadduusan karinna Soon Toban bari ah, saddex Xajka dhexdiisa 'Todobana markuu noqdo waana ruuxaan Maka daganayn, waana in Eebe laga dhawrsado 'Ciqaabtiisu waa darantahay, horjoogsiga la sheegina waa sidii Nabiga iyo Asaxaabtiisa lagu sameeyey Sanadkii Lixaad ee Xudeybiyo. Al-Baqarah (194-196).

197. Xajku waa Bilo la yaqaan, ee ruuxii Isku waajibiyaa Xajka (oo Xaj Xirta) bilahaas gudahooda, isutagid, fisqi iyo muran ma jiro Xajka dhexdiisa, waxaad fashaan oo khayr ah wuu ogaan Eebe, ee sahay qaata, sahay tan u khayrbadanna waa dhawrsashada, ee iga dhawrsada kuwa caqliga lahow.

الْحَجُّ أَشْهُرٌ مَّعْلُومَاتٌ فَمَنْ فَرَضَ فِيهِنَّ
الْحَجَّ فَلَا رَفَثَ وَلَا فُسُوقَ وَلَا جِدَالَ فِي الْحَجِّ
وَمَا تَفَعَّلُوا مِنْ خَيْرٍ يَعْلَمُهُ اللَّهُ وَتَزَوَّدُوا
فَأِنَّ خَيْرَ الزَّادِ التَّقْوَىٰ وَاتَّقُونِ يَا أُولِي
الْأَلْبَابِ ﴿١٩٧﴾

198. korkiina wax dhib ah ma aha haddaad dalabtaan fadliga Eebihiiin (ganacsi) ee markaad ka soo gadoon-taan Carrafo ku xusa Eebe mashcarul-xaraam agtiisa, una xusa siduu idiin hanuuniyey, waxaadna ahaydeen xaqa hortiis kuwa dhunsan.

لَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَنْ تَبْتَغُوا فَضْلًا مِنْ
رَبِّكُمْ فَإِذَا أَفَضْتُمْ مِنْ عَرَفَاتٍ
فَأَذْكُرُوا اللَّهَ عِنْدَ الْمَشْعَرِ الْحَرَامِ
وَأَذْكُرُوا مَا هَدَىٰكُمْ وَلَئِنْ كُنْتُمْ مِنْ
قَبْلِهِ لَمِنَ الضَّالِّينَ ﴿١٩٨﴾

199. markaas ka gadooma meesha Dadka ka gaddoomi dambidhaafna waydiista Eebe, ilaahay waa dambi dhaafe naxariistee.

ثُمَّ أَفِضُوا مِنْ حَيْثُ أَفَاضَ النَّاسُ
وَاسْتَغْفِرُوا لِلَّهِ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٩٩﴾

Bilaha Xajka waa Soonfur sidataal iyo Tobanka Arafo (Dulxija) ciddii xarmata Xajna waa ka reebantahay inay xaaskiisa is arkaan (Isutagid), sidoo kale waa reebanyihiin xumaan iyo dambi iyo fisqi, inkastooy xumaantu reebantahay had iyo jeer haddana way ka sii darantahay waqtiga Xajka, murankuna waa reebanyahay Xajka, waana in la sahay qaato iyadoo la ogyahay in cabsida Eebe sahay ugu fiicantahay, ceebna ma aha in ganacsi xalaal ah lagu sameeyo Xajka, waana Eebe in aad loo xusaa kibirka iyo islawaynidana layska jiro, waxaana sugnaatay: Ruuxii xajiya oon tagid iyo fisqi la imaan wuxuu noqdaa isagoo dambi ka ah siday Hooyadii ku dhashay, waxaa wariyey Muslim iyo Bukhaari. Al-Baqarah (197-199).

200. markaad gudataan camalkiina xusa Eebe saad u xustaan Aabayowgiin ama si ka daran u xusa, Dadka waxaa ka mid ah kuwo dhihi Eebow na sii adduunka wanaag, aan kuna lahayn Aakhiro qayb.

فَإِذَا قَضَيْتُمْ مِنْ سَكَكُمُ فَادْكُرُوا اللَّهَ
كَذِكْرِكُمْ آبَاءَكُمْ أَوْ إِخْوَانَكُمْ أَوْ
النَّاسِ مَنْ يَقُولُ رَبَّنَا آتِنَا فِي الدُّنْيَا
وَمَا لَهُ فِي الْآخِرَةِ مِنْ خَلْقٍ ﴿٢٠٠﴾

201. waxaana ka mid ah Dadka kuwo dhihi Eebow na sii adduunka wanaag, aakhirana nasii wanaag, nagana dheerree Cadaabka Naarta.

وَمِنْهُمْ مَّنْ يَقُولُ رَبَّنَا آتِنَا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِي الْآخِرَةِ حَسَنَةً وَقِنَا عَذَابَ النَّارِ ﴿٥١﴾

202. kuwaasi waxay mudan qayb waxay kasbadeen, Eebana waa deg degtaa xisaabtiisu.

أُولَئِكَ لَهُمْ نَصِيبٌ مِّمَّا كَسَبُوا وَاللَّهُ سَرِيعُ الْحِسَابِ ﴿٥٢﴾

203. xusa Eebe maalmo tirsan (Saddex maalmood Iidda carafo dabadeed), ciddiise dag dagta laba maalmood dhexdood ma saarra dambi korkiisa, (oo waa loo dhaafaa) ruuxii dib marana ma saarra dambi korkiisa labaduna waa hadday xajka ku dhawrsadaan, ka dhawrsada Eebe, ogaadana in xaggiisa laydiin soo kulmin.

* وَأذْكُرُوا اللَّهَ فِي أَيَّامٍ مَّعْدُودَاتٍ فَمَنْ تَعَجَّلَ فِي يَوْمَيْنِ فَلَا إِشْرَ عَلَيْهِ وَمَنْ تَأَخَّرَ فَلَا إِشْرَ عَلَيْهِ لَئِنْ أَتَىٰ وَأْتَمَّ اللَّهُ وَأَعْلَمُوا أَنكُمُ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٥٣﴾

Xusidda Eebe yaa wax walba ka horeeysa kana wanaagsan, waana in Eebe wanaaga aakhiro iyo adduunba la waydiistaa een adduun uun lagu gaabsan, illeen Eebaa wax walba xisaabiye waana in Eebe aad loo xuso ayaamaha ciidda Arrafo ka dambeeya. waxaa sugaatay inuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku ducaysan jiray Eebow na sii Adduunka wanaag aakhirana wanaag nagana dhawr cadaabka Naarta. Al-Baqarah (200-203).

204. Dadka waxaa ka mid ah mid ku yaab galin hadalkiisu noloshan adduun, maragna gashay Eebe waxa qalbigiisa ku sugan, isagoo dood badan.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يُعْجِبُكَ قَوْلُهُ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيُشْهَدُ اللَّهُ عَلَىٰ مَا فِي قَلْبِهِ وَهُوَ أَلَدُّ الْخِصَاءِ ﴿٥٤﴾

205. markuu jeedsadana, socda dhulka fasaad dartii iyo inuu halligo beeraha iyo faracaba. Eebana ma jecla fasaadka.

وَإِذَا تَوَلَّىٰ سَعَىٰ فِي الْأَرْضِ لِيُفْسِدَ فِيهَا وَيُهْلِكَ الْحَرْثَ وَالنَّسْلَ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ الْمُسَادَةَ ﴿٥٥﴾

206. marka loo dhoho ka dhawrso Eebana waxa qabata isla weyni dambi dartiis, waxaa ku filan jahannamo iyadaana u xun gogol.

وَإِذَا قِيلَ لَهُ اتَّقِ اللَّهَ أَخَذَتْهُ الْعِزَّةُ بِالْإِثْمِ فَحَسْبُ لَهُ جَهَنَّمُ وَكَانَ الْمِهَادَ ﴿٥٦﴾

207. dadkana waxaa ka mid ah mid gadi naftiisa, dalab raalli ahaanshaha Eebe dartii, Eebana waa u naxariistaha addoomada.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يَشْرِي نَفْسَهُ ابْتِغَاءَ مَرْضَاتِ اللَّهِ وَاللَّهُ رَءُوفٌ بِالْعِبَادِ ﴿٥٧﴾

Hadalmaacaan iyo uur xun oo is khilaafsan waa calaamadaha dadka xun Ee fasaad iyo xumaan la socda Dhulka, saas oo kale doodda, muran badnida iyo xaqa iska kibrinta. Waase in lagu dadaalo raali ahaanshaha Eebe.

Saciid waxaa laga wariyay: Kutubta qaarkeed waxaa ku sugan addoomada waxaa kamid ah kuwa

carrabkoodu ka macaan yahay malab, qalbigooduna ka khadhaadhyahay dacar. Waxayxidheen maryo suuf ka jilicsan, kuna gatay aduunka Diinta, Eebana wuxuu yidhi waynideeydaan ku dhaartee waaxan ku diri fidmo warcerisa markasuu yidhi: Maxamad Binu kacab Waxaa laga heli Quraanka, markaasuu Siciid yidhi; xagee, wuxuuna akhriyay: Dadka waxaa kamid ah... Al-Baqarah (204-207).

208. kuwa xaqa rumeeyow u gala Islaamka dhammaan (kuna camal fala) hana raacina Waddooyinka Shaydaanka, wuxuu idiin yahay col Cade.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا ادْخُلُوا فِي السِّلْمِ
كَافَّةً وَلَا تَتَّبِعُوا خُطُوَاتِ الشَّيْطَانِ إِنَّهُ
لَكُمْ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿٢٠٨﴾

209. haddaad simbiriiraxataan intuu idiin yimid xujooyin ogaada in Eebe yahay adkaade falsan.

فَإِنْ رَأَيْتُمْ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَ نَصْرَ الْمَلِئِكَةِ فَاعْلَمُوا
أَنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٠٩﴾

210. miyey sugi inuu Allaah ugu yimaaddo daruuro dhexdood mooyee, iyo Malaa'igtu lana xukumo amarka, xagga Eebaana loo celin umuuraha.

هَلْ يَتَذَكَّرُونَ إِلَّا أَنْ يَأْتِيَهُمُ اللَّهُ فِي ظُلَلٍ مِنَ
الْعَمَاءِ وَالْمَلَكِ وَالْقَاضِي الْأَمْرُ وَالِ اللَّهِ
تَرْجِعُ الْأُمُورَ ﴿٢١٠﴾

211. waydii Bani Israa'iil imisaan siinay Aayad Cad, ciddii badasha Nicmada Eebe intay u timid, Eebe Ciqabtiisu waa ku darantahay.

سَلِّبُوا إِسْرَائِيلَ كُرُوءَاتِهِمْ مِنْ آيَةٍ بَيِّنَةٍ وَمَنْ يُبَدِّلْ
نِعْمَةَ اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَتْهُ فَإِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ
الْعِقَابِ ﴿٢١١﴾

212. waxaa loo qurxiyey kuwa Gaaloo-bay Nolosha dhaw ee adduun, waxayna ku jees jeesaan kuwa rumeeyey xaqa, kuwa dhawrsada iyagaana ka sarrayn Maalinta Qiyaame, Eebana wuu Arzaa-qaa cidduu doono Xisaab la'aan.

رُؤْيَا لِلَّذِينَ كَفَرُوا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا وَسَخَّرْنَا مِنْ آلِ بْنِ
عَامْرٍ وَالَّذِينَ آمَنُوا أَنْفُسَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَاللَّهُ سَرِيعُ
الْحِسَابِ ﴿٢١٢﴾

Waa in Dadku wadagalo Diinta, kuna dhaqmo dhammaanteed, Wadiiqadaha Shaydaankana laga leexdo, haddii la gafana Eebe waa a woodle, waana kan Qiyaamada kala bixin Dadka, xaalkuna u noqon, Bani Israa'iil waa ogyihiin inta xujo u timid, Ciddiise diida Nicmada Eebe oo badasha kuna jees jeesta Xaqa iyo Dadkiisa Eebe wuu Ciqabi'wuxuuna sara marin Xaq rumeeyaha. Al-Baqarah (208-212).

213. dadku wuxuu ahaa ummad kaliya, wuxuuna Eebe u bixiyey Nabiyo u bishaareeya una diga, wuxuuna la soo dajiyey Kitaab Xaq ah, si ay ugu xukumaan Dadka dhexdiisa waxay isku khilaafaan, iskumana khilaafin dhexdiisa kuwii la siiyey mooyee intay u yimaadaan xujooyin, Xasad dhexdooda ah dartiis, wuxuuna ku hanuuniyey Alle waxay isku khilaafeen oo Xaq ah idankiisa kuwii rumeeyey, Eebana waa

كَانَ النَّاسُ أُمَّةً وَاحِدَةً فَبَعَثَ اللَّهُ النَّبِيِّينَ
مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ وَأَنْزَلَ مَعَهُمُ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ
لِيَحْكُمُوا بَيْنَ النَّاسِ فِيمَا اخْتَلَفُوا فِيهِ وَمَا اخْتَلَفَ فِيهِ
إِلَّا الَّذِينَ أُوتُوهُ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَتْهُمْ بَيِّنَاتٌ مِنْ
بَيْنِهِمْ فَوَهَّدَى اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا لِمَا اخْتَلَفُوا فِيهِ
مِنَ الْحَقِّ بِإِذْنِهِ وَاللَّهُ يَهْدِي مَنْ يَشَاءُ إِلَى صِرَاطٍ
مُسْتَقِيمٍ ﴿٢١٣﴾

ku hanuuniyaa Cidduu doono Jidkiisa toosan.

214. ma waxaad u maleyseen inaad galaysaan Jannada isagoon idiin imaanin wixii u yimid kuwii tegay ee hore oo kale, waxaa taabtay Baahi iyo Cudur, waana la gilgilay intuu ka dhaho Rasuulku iyo kuwa rumeeyey lana jira, waa goorma gargaarka Eebe, gargaarka Eebana waa dhawyahay.

أَمْ حَسِبْتُمْ أَنْ تُدْخَلُوا الْجَنَّةَ وَلَمَّا يَأْتِكُمْ مَثَلُ الَّذِينَ
خَلَوْا مِنْ قَبْلِكُمْ مَسَّتْهُمُ الْبَأْسَاءُ وَالضَّرَّاءُ وَزُلُوفًا
حَتَّى يَقُولَ الرَّسُولُ وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُ مَتَى نَصُرُ
اللَّهُ ۗ أَلَا إِنَّ نَصْرَ اللَّهِ قَرِيبٌ ﴿٢١٤﴾

Dadku Xaquu ku kulansanaa intay iska Khilaafaan Xasad dartiis, wuxuuse Eebe Hanuuniyey kuwa Xaqa rumeeyey Jannada Ciyaar lagama helo iyo Imtixaan la'aan. waxaa sugnaatay in Nabigu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebaan ku dhaartee wuu taameyli Ilaahay Diintan inta ruuxu ka tago Sanca oo aado Xadramuut, isagoon ka yaabayn Eebe mooyee iyo Waraabaha Adhigiisa, waxaase tihii Qoom deg dagi. Al-Baqarah (213-214).

215. waxay ku warsan maxay bixiyaan, waxaad dhahdaa waxaad bixisaan oo khayr ah waxaa mudan Labada waalid, qaraabada, Agoonta, Masaakiinta iyo Socdaha Waxaad fashaana oo khayr ah Eebe waa ogyahay.

يَسْأَلُونَكَ مَاذَا أُنفِقُونَ ۗ قُلْ مَا أَنْفَقْتُ مِنْ خَيْرٍ
فَلِللَّذِينَ وَاللَّذِينَ الْأَقْرَبِينَ وَاللْيَتَامَىٰ وَاللْمَسْكِينِ وَالرِّبَا
السَّبِيلِ ۗ وَمَا تَفْعَلُونَ مِنْ خَيْرٍ قَاتِ اللَّهُ بِهِ
عَلَيْكُمْ ﴿٢١٥﴾

216. waxaa laydinku waajibiyey Dagaal idinkoo neceb, waxaa laga yaabaa inaad nacdaan wax, isagoo khayr idiin ah, waxaana laga yaabaa inaad jeclaa-taan wax isagoo shar idiin ah, Eebaa wax og idinkuse ma ogidin.

كُتِبَ عَلَيْكُمُ الْقِتَالُ وَهُوَ كَرْهٌ لَكُمْ وَعَسَىٰ أَنْ
تَكْرَهُوا شَيْئًا وَهُوَ خَيْرٌ لَكُمْ وَعَسَىٰ أَنْ يُحِبُّوا
شَيْئًا وَهُوَ شَرٌّ لَكُمْ وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ
لَا تَعْلَمُونَ ﴿٢١٦﴾

Waa in wax la sadaqaysto waxna la baxsadaa Dadkana loo naxariisto gaarahaan labada Waalid, qaraabada, agoonta, Masaakiinta iyo Dadka musaafurka ah, Diinta islaamkuna waa Diin naxariis iyo xidhiidhin, waana inay saas gartaan Muslimiintu kuna dhaqmaan, tan kale waxaa lagu waajib yeelay Muslimiinta inay Jidka Eebe ku dagaallamaan, maxaayeeley waxaa loo baahanyahay Caddaalad, Nabadgalyo, Sinaan iyo Barwaaqo kuwada noolaansho intaasna waxaa laga helaa Diinta Islaamka sida ka muuqatay socodka Taariikhda, saas darteed ciddii ka hortimaada socodkaas waa in laga leexiyo, tanse la dhaho Jahaadku ma isdaafacbaa mise waa weerer waa ruuxaan garanin Macnaha Jahaad, Jahaadkuna waa ka guda waynyahay Dagaal, oo waxaaba jira Jahaad aan Dagaal ahayn, waana arrin Cadawga islaamku keeneen, Muslimiintuna qaarkeed si niyad sami ah ugu kala Jabeen iyagoo filii inay Diinta daafici jahaadkuse waa ka waasacsanyahay Difaac iyo Weerer, halkanna kuma faah faahin karro. Al-Baqarah (215-216).

217. waxay ku warsan Dagaalka Bisha xurmaysan (Rajab iyo wax la mid ah) waxaad dhahdaa dagaalku dhexdiisa

يَسْأَلُونَكَ عَنِ الشَّهْرِ الْحَرَامِ قِتَالٍ فِيهِ ۗ قُلْ قِتَالٌ فِيهِ
كَبِيرٌ ۗ وَصَدٌّ عَنِ سَبِيلِ اللَّهِ وَكُفْرٌ بِهِ ۗ

waa waynyahay, ka celinta Jidka Eebe iyo ka Gaalowgiisa iyo Masaajidka xurmeysan iyo ka bixinta ehelkiisa yaase kaga wayn Eebe agtiisa, Gaalaynta Dadka yaana ka wayn Dilka, kama tagaan gaaladu inay idinla dagaalama intay idinka celiyaan Diintiinna hadday karaan, ruuxii ka ridooba Diintiisa oo dhinta isagoo Gaal ah kuwaasi waa kuwa buray camalkoodu adduun iyo aakhiraba kuwaasina waa Naarta Ehelkeeda, wayna kuwaari dhexdeeda.

218. kuwa rumeeyey Xaqa iyo kuwii Hijrooday ee ku jahaaday Jidka Eebe kuwaasi waxay rajayn naxariista Eebe, Eebana waa dambidhaafe naxariista.

Diinta Islaamku ma aha Diin dagaal iyo Dhiigdaadis, hase yeeshee ma aha Diin dulli iyo xadgudub iyo gardarro qaadan iyo in lagu soo duulo xeradeeda, illeen waa dullooday ummad loogu soo duulay Gurigeedee, tan kale Gaalnimada yaa ka weyn bilaha Xurmada leh oo la dagaalamo, Gaalana ma dayso Muslim intay ka gaalayso hadday karaan, waana cid khasaartay oo ehelu Naar ah cid Gaalnimo ku dhimatay (Eebaa laga magangalaye) waxaase khayr iyo naxariis rajayn kuwa Xaqa rumeeya ee xumaanta ka fogaada Jidka Eebana ku Jahaada. Al-Baqarah (217-218).

219. waxay ku waydiin Khamrada iyo Qamaarka waxaad dhahdaa waxaa ku sagan dhexdooda Dambi weyn, iyo wax Nacfi ah dambigooda yaana ka weyn nacfigooda, waxayna kuwaydiin maxay bixiyaan, waxaad dhahdaa (bixiya) saa'idka, saasuuna Eebe idinku cad-dayn aayadihiisa waxaadna mudantihiin inaad fikirtaan.

220. adduun iyo aakhiraba (inaad ka fikirtaan) waxayna ku waydiin agoonta, waxaad dhahdaa wanaajintooda yaa khayrbadan, haddaad dheehdaana waa Walaalihiin, Eebana waa ogyahay cidda wax fasaadin iyo kan hagaajin, haduu doono Eebana wuu idin dhibi lahaa, Eebana waa adkaade falsan.

وَالْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَإِخْرَاجِ أَهْلِهِ مِنْهُ أَكْبَرُ
عِنْدَ اللَّهِ وَالْفِتْنَةُ أَكْبَرُ مِنَ الْقَتْلِ وَلَا يَزَالُونَ
يُقَاتِلُونَكُمْ حَتَّى يَبْرُتُوا وَكُفْرٌ عَنْ دِينِكُمْ إِنِ اسْتَظَلُّوا
وَمَنْ يَبْرُتْ مِنْكُمْ عَنْ دِينِهِ فَسِمَةٌ وَهُوَ
كَافِرٌ فَأُولَئِكَ حَبِطَتْ أَعْمَالُهُمْ فِي الدُّنْيَا
وَالْآخِرَةِ وَأُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا
خَالِدُونَ ﴿٢١٧﴾

إِنَّ الدِّينَ أَمَانٌ وَالَّذِينَ هَاجَرُوا وَجَهَدُوا فِي
سَبِيلِ اللَّهِ أُولَئِكَ يَنْجُوْنَ رَحْمَتَ اللَّهِ وَاللَّهُ غَفُورٌ
رَحِيمٌ ﴿٢١٨﴾

*يَسْأَلُونَكَ عَنِ الْخَمْرِ وَالْمَيْسِرِ قُلْ فِيهِمَا إِشْمٌ
كَبِيرٌ وَمَنْفَعَةٌ لِلنَّاسِ وَإِشْمُهُمَا أَكْبَرُ مِنْ
نَفْعِهِمَا وَيَسْأَلُونَكَ مَاذَا يُنْفِقُونَ قُلِ الْمَغْفُورُ
كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ
تَتَفَكَّرُونَ ﴿٢١٩﴾

فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَيَسْأَلُونَكَ عَنِ الْيَسْمِ قُلْ
إِضْلَاحٌ لَهُمْ خَيْرٌ لَّوْنُ خَالِ الطَّوْهَرِ فَإِخْوَانُكُمْ
وَاللَّهُ يَعْلَمُ الْمُفْسِدَ مِنَ الْمُصْلِحِ وَلَوْ سَاءَ اللَّهُ
لَأَعْتَبْتَكُمْ إِنْ لَمْ يَرْحَمِ اللَّهُ

Khamradu waa wax xun siduu garan ruuxii Caqli leh, maxaayeelay waxay ka qaadda ruuxa garaadka oo Dadku kaga duwanyahay Xoolaha, Diinta Islaamkuna waa reebtay Cabbideeda inkastoo tartiib tartiib loo xaraameyey, sidoo kale waxaa xaraan ah Qamaarka oo ah Cunid Xaq daro ee Xoolo Dad

kale taasina kuma banaana Diinta Islaamka waana in la fikiraa oo wax la gartaa, lana sadaqaaysto gaar ahaan dheeraadka laguna dadaalo dhaqaalaynta Agoonta haddaad dheehdaana dhib kuma jiro 'isagoo Eebe kala ogyahay kan wax hagaajin iyo kan fasaadin. Al-Baqarah (219-220).

221. ha guurasanina Haweenka mushrikaadka ah, intay ka rumeeyaan, addoon rumaysan xaqa yaa ka khayr roon mid mushrikad ah (Eebe la wadaajisay cibaado) haba idin yaabgaliso, hana u guurinina ragga mushrikiinta ah intay ka rumeyn, addoon rumeeyey xaqa yaa ka khayr badan mid mushrik ah haba idin yaab galiyee, kuwaasu waxay idiin ku yeedhi Naarta, Eebana wuxuu idiin ku yeedhi Janno iyo Dambidhaaf idinkiisa, wuxuuna u caddayn aayaadkiisa Dadka si ay u xusuustaan.

222. waxay ku waydiin Caadada (Haweenka) dheh waa dhib (wasakh) ee ka fogaada meesha Caadada, hana u dhaawanina intay ka daahir noqon, markay daahir noqdaan uga taga meeshuu idin faray Eebe, Ilaahayna wuxuu jecelyahay kuwa toobadda badan, wuxuuna jecelyahay kuwa isdaahiriya.

223. Haweenkiinnu beerbay idiinyihiin ee ugutaga beertiinna saad doontaan "oo bannaan", una hormarsada naftiinna "wanaag" Eebana ka dhawrsada, ogaadana inaad la kulmaysaan Eebe una bishaaree Muminiinta.

Gaaladaan Kitaab lahayn waxaa xaaraan ah in lays guursado 'Gaaloodhanna waa ka reebantahay Haweenay Muslim ah, Haweenkana wa inaan loo tagin waqtiga Caadada illeen wa xaaraane, waxaase xalaal ah Meesha Eebe xalaaleeyey markay daahir noqdaan, Haweenkana waa beer oo kale. Waana in looga tago meesha Eebe banneyey. Wanaag iyo khayrna la hormarsado lana ogaado in Eebe lala kulmi lagana dhawrsado loona bishaareeyo Mu'iniinta. Al-Baqarah (221-223).

224. ha uga yeelina Eebe kabdhood dhaartiinna inaadn samo falayn oo dhawrsanayn, oo hagaajineyn Dadka dhexdiisa, Eebana waa maqle wax og.

225. idiin ma qabanayo Eebe dhaar qasad la'aaneed, wuxuuse idiin qaban

وَلَا تَتَّبِعُوا الْمُشْرِكِينَ حَتَّىٰ يُؤْمِنُوا وَلَآئِمَّةٌ
مُّؤْمِنَةٌ حَيَّرَ مِنْ مُشْرِكِهِمْ وَلَوْ أَعْبَدْتُمْ
وَلَا تَتَّبِعُوا الْمُشْرِكِينَ حَتَّىٰ يُؤْمِنُوا وَلَعَبْدٌ مُّؤْمِنٌ حَيَّرَ
مِنْ مُشْرِكِيهِمْ وَلَوْ أَعْبَدْتُمْ أُولَئِكَ يَدْعُونَ إِلَى
النَّارِ وَاللَّهُ يَدْعُو إِلَى الْحَيَّةِ وَالْمَعْفُورِ بِإِذْنِهِ
وَيَسِّرُ الْبَلَاءَ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٢٢١﴾

وَسَتَلُونَكَ عَنِ الْمَجِيصِ قُلْ هُوَ أَذَىٰ فَأَعْتَزِلُوا
النِّسَاءَ فِي الْمَجِيصِ وَلَا تَقْرُبُوهُنَّ حَتَّىٰ يَطْهَرْنَ
فَإِذَا طَهَّرْنَ فَأَنتُمْ لَهُنَّ مِنَ حَيْثُ أَمَرَكُمُ اللَّهُ إِنْ اللَّهُ
يُحِبُّ التَّوْبَةَ وَيُحِبُّ الْمُتَطَهِّرِينَ ﴿٢٢٢﴾

يَسْأَلُكُمْ خِزْيُ الْأَمْمَةِ فَأَنْتُمْ أَحْسَنُ لِمَنْ أَنَّىٰ شِئْتُمْ
وَقَدِّمُوا لِأَنْفُسِكُمْ وَأَتَّقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا أَنَّكُمْ
مُلَقَّوْنَ بِبَشِيرِ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٢٢٣﴾

وَلَا تَجْعَلُوا اللَّهَ عُرْضَةً لِأَيْمَانِكُمْ أَنْ تَبَرُّوا وَتَتَّقُوا
وَتُضِلُّوا أَوْلِيَاءَ النَّاسِ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٢٤﴾

لَا يُؤَاخِذُكُمُ اللَّهُ بِاللَّغْوِ فِي أَيْمَانِكُمْ وَلَكِنْ يُؤَاخِذُكُمْ بِمَا

waxay kasbatay quluubtiinnu, Eebana waa dambi dhaafe dul badan.

226. kuwa ka dhaarta Haweenkooda (tan iyo muddo) waxaa la sugi afar bilood, hadday ka noqdaanna Eebe waa dambi dhaafe naxariista.

227. hadday goostaan furidna Eebe waa maqle oge ah.

228. Haweenka la furayna waxay la sugi naftooda saddex daahir, mana u banaana inay qariyaan waxa Eebe ku abuuray ilmo galeenkooda hadday yihiin kuwo rumeeyey Eebe iyo Maalinta dambe. Raggoodaana ku xaq badan soo celintooda arrintaas (cidaaas dhexdeeda) hadday doonaan wanaag, Haweenkuna waxay leeyihiin wax la mid ah waxa korkooda ah si fiican, Raggase waxaa ugu sugnaa korkooda Darajo (Dheeraad) Eebana waa adkaade falsan.

Ma haboona in Eebe si fudud loogu dhaarto had iyo jeer iyo inaan wanaag la falin, dhaartiise Carrabku xado Eebe uma qabto, waxaase laysu qaban tan la niyoodo, kuwa ku dhaarta inay taabanayro Haweenkooda waxaa la sugi afar bilood: Hadday oofiyaan waa wanaag, haddii kale waa inuu furo, Haweenka la furana waxay tirsan seddex daahirnimo iyagoon qarinaan waxa uurkooda ku jira wayna isku xaqleeyihiin labada dhinac inkastoo tan raggu badantahay. Al-Baqarah (224-228).

229. furiddu waa labo jeer, intaas ka dib ama waa haysasho fiican, ama sii dayn fiican, mana bannaana inaad ka qaadataan waxaad siiseen wax, inay ka cabsadaan inayan oogin xuduudda Eebe Mooyee, haddaad ka cabsataan inayan oogin xuduudda Eebe wax dhib ah ma saarna korkooda waxay isku furato, taasi waa xuduudda Eebe ee ha tallaabina ruxii tallaaba xuduudda Eebe kuwaasi waa daalimiinta.

230. hadduu furo uma banaana kadib intay ka guursato Nin kale, hadduu (kaasi) furana dhib ma saarra hadday is Ceshadaan (Isguursadaan) hadday u malayn inay oogixuduudda Eebe, taasi

كَسَبَتْ قُلُوبُكُمْ وَاللَّهُ عَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿٢٢٥﴾

لِلَّذِينَ يُؤَلُّونَ مِنْ نِسَائِهِمْ نَرْصُ أَرْبَعَةَ أَشْهُرٍ فَإِنْ فَاءَ وَإِنْ أَلَّ اللَّهُ عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٢٢٦﴾

وَإِنْ عَزَمُوا الطَّلَاقَ فَإِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٢٧﴾

وَالْمُطَلَّقَاتُ يَتَرَبَّصْنَ بِأَنْسِهِنَّ ثَلَاثَةَ قُرُوءٍ وَلَا يَحِلُّ لَهُنَّ أَنْ يَكْمُنَ مَا خَلَقَ اللَّهُ فِي أَرْجَائِهِنَّ إِنْ كُنَّ يُؤْمِنَنَّ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَنَعَوَّلْتُهُنَّ أَحَقُّ بِرَدِّهِنَّ فِي ذَلِكَ إِنْ أَرَادُوا إِصْلَاحًا وَلَهُنَّ مِثْلُ الَّذِي عَلَيَهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ وَلِلرِّجَالِ عَلَيْهِنَّ دَرَجَةٌ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٢٨﴾

الطَّلَاقُ مَرَّتَانٍ فَإِمْسَاكٌ بِمَعْرُوفٍ أَوْ تَسْرِيحٌ بِإِحْسَانٍ وَلَا يَحِلُّ لَكُمْ أَنْ تَأْخُذُوا مِمَّا آتَيْتُمُوهُنَّ شَيْئًا إِلَّا أَنْ يَخَافَا أَلَّا يُقِيمَا حُدُودَ اللَّهِ فَإِنْ خِفْتُمَا أَلَّا يُقِيمَا حُدُودَ اللَّهِ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِمَا فِيمَا افْتَدَتْ بِهِ تِلْكَ حُدُودُ اللَّهِ فَلَا تَعْتَدُوهَا وَمَنْ يَتَعَدَّ حُدُودَ اللَّهِ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿٢٢٩﴾

فَإِنْ طَلَّقَهَا فَلَا حِلَّ لَهَا مِنْ بَدْحَيْ نِكَاحٍ رَبَّحًا وَرَبًّا عَدْرَةً فَإِنْ طَلَّقَهَا فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِمَا أَنْ يَتَرَاجَعَا إِنْ ظَنَّا أَنْ يُقِيمَا حُدُودَ اللَّهِ وَتِلْكَ حُدُودُ اللَّهِ يُبَيِّنُهَا لِقَوْمٍ

waa xuduudda Eebe wuxuuna u cad-dayn ciddii wax og.

يَعْلَمُونَ ﴿٢٣٠﴾

Guurka waxaa looga danleeyahay in lagu dhiso Guri fiican oo uu ka abuurmo Qoys wanaagsan, Islaamkuna ma jecla in la dumiyoo Gurigaas, saas darteed yuu furitaanku u noqday wax Eebe u cadhoodo, hayeeshee hadduu noqdo laga Ma maarmaan waa in si quruxsan laysu furaa, Xoolo xaq darrana la kala cunin, waxaana roon inuusan israacinin Dalaqaaha, waxaa laga yaabaa in wax dib ka soo cusboonaadee, inay Haweenaydu Xoolo ku gadato Dalaqaadana waa banaantahay, mar hadday Dalaqaadoo dhan ku kala tagaanna ma banaana inay isa soo ceshadaan haddaan nin kale guursan oosan furin, kaasoon maxlal ahayn.

Anas Binu Maalig waxaa laga wariyey inuu yidhi: Ninbaa yimid Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) wuxuuna yidhi Rasuulka Eebow wuxuu sheegay Eebe furidda laba jeer ee aaway tii Seddexaad wuxuuna yidhi: Haysasho fiican ama siidayn fiican. Al-Baqarah (229-230).

231. haddaad furtaan haweenka oy gaadhaan mudadooda u haysta si fiican ama u siidaaya si fiican, hana u haysanina inaad dhibtaan si aad u xadgudubtaan, ruuxii fala sidaas wuxuu dulmiyey naftiisa, ee ha ka yeelina aayaadka Eebe jees jees, xusuustana Nicmada Eebe ee korkiina, iyo wuxuu ku dejiyey korkiina oo Kitaab iyo xigmad ah (Sunnada) wuu idinku wacdoon Eebe Quraanka, ee ka dhawrsada Eebe, ogaadana in Eebe wax kasta ogyahay.

وَإِذَا طَلَّقْتُمُ النِّسَاءَ فَبَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَأَمْسِكُوهُنَّ
بِمَعْرُوفٍ أَوْ سِرِّهِنَّ بِمَعْرُوفٍ وَلَا تَمْسِكُوهُنَّ
ضُرَارًا لِّتَعْتَدُوا وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ فَقَدْ ظَلَمَ نَفْسَهُ
وَلَا تَخْذُوا أَيْدِي اللَّهِ هُرُورًا وَأَذْكُرُوا نِعْمَتَ اللَّهِ
عَلَيْكُمْ وَمَا أُنزِلَ عَلَيْكُمْ مِنَ الْكِتَابِ وَالْحِكْمَةِ بِعَظْمِ
بِهِ ۗ وَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٢٣١﴾

232. haddaad furtaan Haweenka oo ay gaadhaan mudadooda ha u diidina inay guursadaan nimankooda hadday raalli isu noqdaan si fiican, arrintaasu waa mid la idinku waanin ciddii idinka mid ah oo rumayn Eebe iyo Maalinta dambe, saasaana idiin waanaagsan oo idiin nadiifsan, Eebana waa ogyahay idinkuna ma ogidin.

وَإِذَا طَلَّقْتُمُ النِّسَاءَ فَبَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَلَا تَعْضُلُوهُنَّ
أَنْ يَنْكِحْنَ أَزْوَاجَهُنَّ إِذَا تَرْضَوْنَ بَيْنَهُمْ بِالمَعْرُوفِ
ذَلِكَ يُوعِظُ بِهِ مَنْ كَانَ مِنْكُمْ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ
الْآخِرِ ۗ ذَلِكَ آيَاتُ لَكُمْ وَأَطَّهَرُوا لِلَّهِ يَعْلَمُونَ
لَا تَعْلَمُونَ ﴿٢٣٢﴾

Xaq ma aha mana habboona in Haweenka la dhibo, waa in si fiican laysu qabaa ama sifiican loo kala tago, mase banaana in loo xajisto si loo dhibo, saasina waa tacadi iyo gardarro iyo ku ciyaarid aayadaha Eebe, waana inaan la halmaamin Nicmada Eebe oo ah Quraanka iyo Sunada Nabiga'waana in xumaanta laga dhawrsado' mar hadday laba ruux is furaana ma habboona in la cidhiidhyo Haweeneyda loona diido inay guursato Ninkay isku raalli noqdaan, waxaana arrintaas loo sheegi ciddii xaqa rumeysay, Eebe iyo Qiyaamada. Al-Baqarah (231-232).

233. Waalidaadka (Hooyooyinku) wa- *وَالْوَالِدَاتُ يُرْضَعْنَ أَوْلَادَهُنَّ حَوْلَيْنِ كَامِلَيْنِ لِمَنْ أَرَادَ

xay nuujin Caruurtooda Labo Sano oo dhamaystiran Cidii doonta inay taa-myeesho nuugidda, kan wax loo dhalayna waxaa saaran Cunadooda iyo arradboxooda si fiican, lagumo dhibo naf waxayna awoodin laguma dhibo Hooyo Ilmaheeda dartiis (lamana dhibo) aabo ilmihiiisa dartiis, kan wax dhaxlaya waxaa saaran taasoo kale, hadday doonaan gudhin iyagoo raalli ah iyo wadatashi dhib ma saarra korkooda, haddaad doontaan inaad u nuujin dalabtaan Caruurtiina (Haweenay Kale) dhib korkiinna ma saarra haddad udhiibtaan waxaad bixinaysaan si fiican, ka dhawrsada Eebe, ogaadana in waxaad camalfalaysaan Eebe arko.

Nuujinta ilmaha waa arrin muhiim ah oo loo baahanyahay inay Hooyadu fasho hadduusen jirin wax garowsha ah, aabahana waxaa saaran masruufka iyo arrad baxa Hooyada, iyadoo Eebe cidna ku mashaqaaynin wuxuusan karin, markstoooy isku ogolaadaan in la gudhiyana waxba kuma jabna haddaan Hooyo, aabe iyo ilmaha midna lagu dhibayn, hadday cid kale nuujiso dhib ma leh haddii si fiican xuquuqda laysu siiyo, iyadoo Eebe laga dhawrsan'lana ogyahay in Eebe arko waxa la falii. Nabiguna (Naxariis iyo Nabodgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: wax ma xaaraanyeesho nuugidaan labo Sano dhexdeed ahayn. Al-Baqarah (233)

234. kuwa la oofsado (Dhint) oo idinka mid ah oo ka taga Haween waxay la sugi (Ciddo) naftooda afar bilood iyo toban bari, markay gaadhaan mudadoodana wax dhib ah idinkama saarra waxay la ku falaan naftooda si fiican, Eebana waxaad falaysaan waa ogyahay.

235. dhib (dambi) korkiinna ma aha waxaad sarbeebtaan oo hadal Haween ah (doonid) ama aad ku qarisaan naftiina, Eebe waa ogyahay inaad sheegaysaan Haweenkaas, laakiin hawgu yaboohina qarsoodi inaad dhahaysaan hadal fiican mooyee, ha goynin (ha u qasdina) xidhidda guurka intuu ka gaadho Kitaabku "ciddadu" Waqtigooda ogaadana in Eebe ogyahay waxa

أَنْ يُبَيِّنَ الرِّضَاعَةَ وَعَلَى الْمَوْلُودِ لَهُ رِزْقُهُنَّ وَكِسْوَتُهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ لَا تُكَلِّفُ نَفْسٌ إِلَّا أَوْسَعَهَا وَلَا نَضَاءَ وَلَا يَدَةَ يُولَدُهَا وَلَا مَوْلُودَ لَهُ يُولَدُهَا وَعَلَى الْوَارِثِ مِثْلُ ذَلِكَ فَإِنْ أَرَادَا فِصَاً لَا عَن تَرَاحِيصٍ مِنْهُمَا وَتَشَاوُرٍ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِمَا وَإِنْ أَرَدْتُمْ أَنْ تُنْزِعُوا أَوْلَادَكُمْ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ إِذَا سَلَّمْتُمْ مَا آتَيْتُم بِالْمَعْرُوفِ وَاتَّقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٢٣٥﴾

وَالَّذِينَ يُتَوَفَّوْنَ مِنْكُمْ وَيَذَرُونَ أَزْوَاجًا بَيِّنَاتٍ لَّيْسَ بِأَنْفُسِهِنَّ أَرْبَعَةَ أَشْهُرٍ وَعَشْرًا فَإِذَا بَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِيمَا فَعَلْنَ فِي أَنْفُسِهِنَّ بِالْمَعْرُوفِ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٢٣٤﴾

وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِيمَا عَرَضْتُمْ بِهِ مِنْ خِطْبَةِ النِّسَاءِ أَوْ أَكْتَمْتُمْ فِي أَنْفُسِكُمْ عَلَيْهِمُ أَنْ يَكْرَهُنَّ سِتْرًا لَمْ يَرْوِيَنَّ عَنْهُنَّ وَلَكِنَّ لَأَنْوَاعَهُنَّ سِرًّا إِلَّا أَنْ تَقُولُوا قَوْلًا مَعْرُوفًا وَلَا تَعْرَضُوا عَقْدَةَ النِّكَاحِ حَتَّى يَبْلُغَ الْكِتَابُ أَجَلَهُ. وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي أَنْفُسِكُمْ فَاحْذَرُوهُ وَأَعْلَمُوا

naftiina ku sugan ee ka digtoonaada, ogaadana in Eebe dambi dhaafe dulsan yahay.

236. dhib ma saarro korkiina haddaad Haweenka furtaan idinkoon taaban ama u qadarin meher, ugu deeqa kii hodona qaddarkiisa kan cidhiidhyanna qaddarkiisa, waa raaxayn wanaag ah oo xaq ku ah kuwa ixsaanka sameeya.

أَنَّ اللَّهَ عَفُورٌ غَلِيمٌ ﴿١٦٥﴾

لَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ إِنْ طَلَقْتُمْ النِّسَاءَ مَا لَمْ تَمْسُوهُنَّ
أَوْ تَفْرِضُوا لَهُنَّ فَرِيضَةً وَمَتَّعُوهُنَّ عَلَى الْمَوْسِمِ
قَدْرَهُ وَعَلَى الْمَقْتَرِ قَدْرُهُ مَتَّعًا بِالْمَعْرُوفِ حَقًّا عَلَى
الْمُحْسِنِينَ ﴿١٦٦﴾

Waxaa Eebe jideeyey in Haweenka laga dhinto sugaan muddo ah afar Bilood iyo Toban Bari'markay muddadaas dhameystaana waxba korkooda ma aha hadday Guursadaan si wanaagsan, mudadaas ay cidadda ku jirtona ma haboona in guur loo caddeeyo si dul mar ah mooye, mana aha in guurkooda la goosto intay muddadu ka dhamaan, tan kale haddii la furo Haweenay aan la taaban meherna loo sheegin wax meher ah ma waajibayo'wuxuuse bixin mutco gacan maris uun iyo awooddiis, waana arrin xaq ah, waxaana sugnaaday: inayna bannaanayn inay Haweeney xaqa rumeysan isubasaasiso qof saddex Maalmood wax kabadan, Ninkeeda oy afar bilood iyo Toban bari u tirsan mooyee. Al-Baqarah (234-236).

237. haddaad furtaan Haweenka taabasho ka hor idinkoo wax (Meher ah) u qaddaray waxay mudan kala badhka waxaad qaddarteen, inay cafiyaan mooyee ama uu cafiyo midka gacantiisu xidhida nikaaxu ku jiro, (waa ninka ama waliga) haddaad iska cafisaan yaa u dhowse dhawrsashada, hana halmaamina fadliga (dheeraadka) dhexdiina ah, Eebana waxaad camalfalaysaan wuu arkaa.

وَإِنْ طَلَقْتُمْوهُنَّ مِنْ قَبْلِ أَنْ تَمْسُوهُنَّ وَقَدْ فَرَضْتُمْ
لَهُنَّ فَرِيضَةً فُضِّصْ مَا فَرَضْتُمْ إِلَّا أَنْ يَعْفُوا
أَوْ يَصِفُوا الَّذِي بَيْنَهُمَا عَقْدَةُ النِّكَاحِ وَأَنْ تَعْفُوا
أَوْ يَتَّقُوا لِلتَّقْوَى وَلَا تَنْسُوا الْفَضْلَ بَيْنَكُمْ إِنْ اللَّهُ بِمَا
تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١٦٧﴾

238. xifdiya (ilaaliya) Salaadaha iyo Salaadda dhexe (sharafta badan) (Casarka) una istaaga dar Eebe idinkoo adeeci, (khushuuci).

حَافِظُوا عَلَى الصَّلَوَاتِ وَالصَّلَاةِ الْوُسْطَى
وَقَوْمُوا لِلَّهِ قَلْبَيْنِ ﴿١٦٨﴾

239. haddaad cabsataan Tukada idinkoo lug ah ama saaran gaadiid, markaad aamin noqotaan xusa Eebe siduu idiin baray waxaydaan aqoonin, (caadi u tukada).

فَإِنْ خِفْتُمْ فِرَاحًا أَوْ رِكَابًا فَإِدَا أَمْسَرَ
فَأَذْكُرُوا لِلَّهِ كَمَا عَلَّمَكُم مَّا لَوْ كُنْتُمْ
تَعْلَمُونَ ﴿١٦٩﴾

Haddii la furo Haweeney aan la taabanin Meherna loo sheegay waxay mudan meherka nuskiis, inay cafido ama ninku cafiyo intakale ama Waliageedu cafiyo mooyee, inaan wanaaga la halmaamin yaana khayrku ku jiraa, ileen Eebe waa waxwalba arkee, tan kale waa in Eebe lagu Xidhnaado, Saladdana la ilaaliyo gaarahaan saladda Casar. Eebana si dhab ah loo adeeco, haaddii cabsi iyo dagaal jirana waaxaalloo tukan sidii fududaata, marka la aamin noqdana waaxaa loo tukan sicaadi ah, waxaa

sugnaatay in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa hayecele) yidhi: Maalintii (godka) waxay naga shuqlyeen salaaddii dhexe (sharafta lahayd) casarka, Eebe ha ka buuxiyo quluubtooda iyo guryohooda Naar, wuxuuna tukaday Maqribka iyo cishaha dhexdooda. Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim iyo kuwakale. Al-Baqarah (237-239).

240. kuwa la oofsado (dhinta) ee idinka mid ah kana taga Haween dardaaranka Haweenkoodu waa u raaxayn tan iyo Sano iyagoon la bixinayn, haddayse baxaan dhib (Dambi) ma saarra korkiinna waxay ku falaan naftooda oo wanaag ah, Eebana waa adkaade falsan.

241. kuwa la furo waxaa u sugnaaday gacan maris (Mataac) si fiican, waxayna ku tahay Xaq kuwa dhawrsada.

242. saasuuna Eebe idiinku caddayn aayaadkiisa inaad kastaan darteed.

243. ka warran (warkoodu ma ku soo gaadhay) kuwii ka baxay guryahooda iyagoo kuman ah digtooni geeri darteed, markaas ku yidhi Eebe dhinta, soona nooleeyey, Eebana waa saaxibul fadli (dheeraad) Dadka korkiisa, Dadka badankiisuse kuma mahdiyaan.

244. ku dirira Jidka Eebe, ogaadana in Eebe maqli oo ogyahay.

245. waa kuma kan amaah fiican amaahin Eebe, oo uu u laban laabo, Laban laab badan, Eebana wuu ku cidhiidhiyaa Rizqiga oo u waasiciyaa (Cidduudoono) xaggiisaana loo celiyaa Dadka.

Haweenka laga dhinto waa in loo naxariisto, gurigana laga bixinin'tan iyo sano, intaas ka dibna siday rabaan oo wanaag ah hadday falaan xumaan ma leh, sidookale tan la furo waa in la gacan mariyo'illeen way barakaceene. Geeri laga cararana wax ma tarto'Eebana wax walba waa awoodaa, ee waa in jidka Eebe lagu Jahaadaa Sadaqo iyo wanaagna la hormarsadaa si Eebe Laab laab iyo wanaag inoogu abaal mariyo'illeen Eebaa wax u quudiya cid walba siduu doonee, waxayna ku tusin isu naxariisashada iyo Eebe ku xidhnaanta Wanaageeda. Al-Baqarah (240-245).

246. ka warran (warkoodu ma ku soo gaadhay) Madaxdii Bani Israa'iil Muuse ka dib markay ku dheheen

وَالَّذِينَ يُؤْتُونَ مِنْكُمْ وَيَذُرُونَ
أَنْزَجًا وَصِيَّةً لِأَرْوَاحِهِمْ مَتَاعًا إِلَى الْحَوْلِ
غَيْرَ إِخْرَاجٍ فَإِنْ خَرَجْنَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِي
مَا فَعَلْنَ فِي أَنْفُسِهِنَّ مِنْ مَعْرُوفٍ وَاللَّهُ
عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٤٠﴾

وَالْمُطَلَقَاتِ مَتَاعًا بِالْمَعْرُوفِ حَقًّا
عَلَى الْمُتَّقِينَ ﴿٢٤١﴾
كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ
تَعْقِلُونَ ﴿٢٤٢﴾

*أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ خَرَجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ وَهُمْ
أُلُوفٌ حَذَرَ الْمَوْتِ فَقَالَ لَهُمُ اللَّهُ مُوتُوا ثُمَّ
أَحْيَاهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى النَّاسِ
وَلَكِنْ أَكْثَرُ النَّاسِ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٢٤٣﴾

وَقَلِّبُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَعَلَّمُوا أَنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ
عَلِيمٌ ﴿٢٤٤﴾

مَنْ ذَا الَّذِي يقرضُ اللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا فَيضْعِفُهُ
لَهُ أَضْعَافًا كَثِيرَةً وَاللَّهُ يَقْبِضُ وَيَبْضُطُ
وَالِيهِ تُرْجَعُونَ ﴿٢٤٥﴾

أَلَمْ تَرَ إِلَى الْمَلَائِكَةِ مَبْنِي إِسْرَائِيلَ مِنْ بَعْدِ
مُوسَى إِذْ قَالُوا لِنَبِيِّ آلِهِمْ أَعْزَبَ لَنَا مَلِكًا

Nabigoodii Noo soo bixi Malig (xaakim) oonku dagaallanno Jidka Eebe, wuxuuna yidhi armaad mudantihiiin haddii laydinku faralyeelo Dagaalka inaydaan dagaallamin, waxayna dhaheen maxaanaan ugu dagaalamayn Jidka Eebe isagoo nalaga bixiyey guryahannagii iyo Caruurtannadii (Wii-lashannadii) markii lagu faralyeelay korkooda Dagalkii wey jeedsadeen, in yar oo kamid ah mooyee, Eebana waa ogyahay daalimiinta.

247. wuxuuna ku yidhi Nabigoodii: Eebe wuxuu idiinku bixiyey Dhaaluut Malig (Xaakim), waxayna dheheen siddec ugu ahaan xukun korkannaga annago ka mudan Xukunka aan lana siinin Xoolo Waasac ah (Badan) wuxuuna yidhi (Nabigii): Eebe wuu u doortay. Korkiinna wuxuuna u siyaadiyey Waasacnimo Cilmi iyo Jidh (Xoog) Eebana wuxuu siiyaa Xukunkiiisa Cidduu doono, Eebana waa Deeqbadane og.

Waxay Caddayn aayadda hore lagama maarmaanimada in si isku duuban loo dagaallamo iyo hogaan toosan oo isku mid ah'waana waajib marka lagu dulmiyo oo guryahaaga iyo Caruurtaada lagaa Eryo, mana banaana Cabsidu markaasoo kale'Tan kale ciddii toosan oo Cilmi leh Caafimaadna qabta yaa mudan inay wax hogaamiso ee shardi ma aha inuu Xoolo badanyahay siday maleeyeen Dadka qaarkiis, Xaalkuse waa akhlaaq iyo Eebe u dhawaansho. Al-Baqarah (246-247).

248. Nabigoodii wuxuu ku yidhi calaamadda Xukunkiiisu waa inay u timaado taabuud (sanduuq) oy ku jirto xasiloonida Eebihiiin iyo wax ka soo hadhay waxay ka tageen ehelkii Muuse iyo ehelkii Haaruun oo Mala'igtu xambaari arrintaasna calaamaa idiinku sugan haddaad tihiin Mu'miniin.

249. markuu la baxay Dhaaluut Askartii wuxuu yidhi: Eebe wuxuu idinku imtixaami Wabi ee ciddii ka cabta igamid ma aha, ruuxaan wax ka dhad-

نُقِلْتَلْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ قَالَ هَلْ عَسَيْتُمْ إِنْ كُتِبَ عَلَيْكُمُ الْقِتَالُ أَلَّا تُقَاتِلُوا قَالُوا وَمَا لَنَا أَلَّا نُقَاتِلَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَقَدْ أُخْرِجْنَا مِنْ دِيَارِنَا وَأَبْنَاءِنَا فَلَمَّا كُتِبَ عَلَيْهِمُ الْقِتَالُ تَوَلَّوْا إِلَّا قَلِيلًا مِّنْهُمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِالظَّالِمِينَ ﴿٢٤٧﴾

وَقَالَ لَهُمْ نَبِيُّهُمْ إِنَّ اللَّهَ قَدْ بَعَثَ لَكُمْ طَالُوتَ مَلِكًا قَالُوا أَنَّى يَكُونُ لَهُ الْمَلِكُ عَلَيْنَا وَنَحْنُ أَحَقُّ بِالْمَلِكِ مِنْهُ وَلَمْ يَأْتِ سَعَةَ مِنَ الْمَالِ قَالَ إِنَّ اللَّهَ أَصْطَفَاهُ عَلَيْكُمْ وَزَادَهُ بَسْطَةً فِي الْعِلْمِ وَالْجِسْمِ وَاللَّهُ يُؤْتِي مَلِكَهُ مِمَّا يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٤٧﴾

وَقَالَ لَهُمْ نَبِيُّهُمْ إِنَّ آيَةَ مُلْكِهِ أَنْ يَأْتِيَكُمُ التَّابُوتُ فِيهِ سَكِينَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَبَقِيَّةٌ مِّمَّا تَرَكَ آلُ مُوسَىٰ وَآلُ هَارُونَ تَحْمِلُهُ الْمَلَائِكَةُ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَةً لِّكُمُ الَّذِينَ كَفَرُوا مُؤْمِنِينَ ﴿٢٤٨﴾

فَلَمَّا فَصَلَ طَالُوتُ بِالْجُنُودِ قَالَ إِنَّ اللَّهَ مُبْتَلِيكُمْ بِنَهَرٍ فَمَنْ شَرِبَ مِنْهُ فَلَيْسَ مِنِّي

haminna waa iga mid ruux ku qaata gacanta qaadasho mooyee, waxayna kacabbeen xaggiisa wax yar mooyee markuu tallaabay isaga iyo colkii la jirkiisa rumeeyay, waxay dhaheen awood uma lihin Maanta Jaaluud iyo colkiisa, waxayna dhaheen kuwii yaqiinsanaa inay la kulmi Eebee badanaa intay koox yari ka adkaatay koox badan idinka Eebe, ilaahayna wuxuu la jiraa kuwa Samra.

وَمَنْ لَّمْ يَطْعَمَهُ فَإِنَّهُ مِنِّي إِلَّا مَنِ اغْتَرَفَ
عُرْفَهُ يَأْكُودُهُ فَتَشْرِبُ مِنْهُ إِلَّا قَلِيلًا مِّنْهُمْ
فَلَمَّا جَاوَزَهُ هُوَ وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُ قَالُوا
لِلطَّاقَةِ لَنَا الْيَوْمَ بِجَالُوتَ وَجُنُودِهِ قَالَ
الَّذِينَ يَنْظُرُونَ أَنَّهُم مُّلَاكُ اللَّهِ كَرِهْن
فِتْنَةَ قَلِيلٍ عَالَمِينَ فَتَفَتَّ بِأَذْنِ
اللَّهِ وَاللَّهُ مَعَ الصَّابِرِينَ ﴿٥٤﴾

Aayadahan iyo kuwii ka horreeyeyba waxay ka warrami xaalkii Bani Israa'iil Muuse kadib, iyo Qisadii Dhaaluud oo hogaaminayey iyo Jaaluud oo Col Gaalo ahaa watay, waxaana Calaaamadda wanaaggiisa ka mid ahaa in Eebe u soo celiyey Sanduuq Malaa'igu xambaarsantahay oy ku sugantahay wax ka soo hadhay Muuse iyo Haaruun, wuxuuna Dhaaluud u caddeeyey colka in Biyo lagu intixaami ciddii cabtana ayna ka mid ahayn, Kaan Cabbinna ka midyahay, intii badnaydna cabtay oo khilaaftay amarkii waxayna ku calaacaleen inayan awood u lahayn Jaaluud iyo colkiisa kuwiise xaq rumeeyey waxay dheheen: imisaa cid yari mid badan ka adkaatay idanka Eebe. Al-Baqarah (248-249).

250. markay u soo muuqdeen Jaaluud iyo Colkiisii waxay dhaheen Mu'miniintii Eebow ku shub korkannaga Samir, sugna Gomadahanaga noogana gargaar Qoomka Gaalada ah.

وَلَمَّا بَرَزُوا لِجَالُوتَ وَجُنُودِهِ قَالُوا رَبَّنَا
أَفْرِغْ عَلَيْنَا صَبْرًا وَثَبِّتْ أَقْدَامَنَا وَانصُرْنَا
عَلَى الْقَوْمِ الْكَافِرِينَ ﴿٥٥﴾

251. markaasay (Mu'miniintii) jabiyeen Gaaladii idinka Eebe, wuuna dilay Daawuud Jaaluud, wuxuuna siiyey Eebe Daawuud Xukun iyo xigmo (Nabinimo iyo Cilmi) wuxuuna baray wuxuu doono, hadayan jirin ku reebid-da eebe dadka qaarkood qaarka (kale) waxaa fasaadi lahaa dhulka hasayees-hee Eebe waa fadli u saaxiib "u deeq" caalamka.

فَهَرَمُوهُمْ بِأَذْنِ اللَّهِ وَقَتَلَ دَاوُدُ
جَالُوتَ وَءَاتَاهُ اللَّهُ الْمُلْكَ
وَالْحِكْمَةَ وَعَلَّمَهُ مَا يَشَاءُ وَلَوْلَا دَفْعُ اللَّهِ
النَّاسَ بَعْضُهُمْ لِبَعْضٍ لَّفَسَدَتِ الْأَرْضُ
وَلَكِنَّ اللَّهَ ذُو فَضْلٍ عَلَى الْعَالَمِينَ ﴿٥٦﴾

252. taasi waa aayaadka Eebe waana kugu akhriyaynaa si xaq ah, adiguna Waxaad kamidtahay kuwa la soo diray «Rasuullada»;

تِلْكَ آيَاتُ اللَّهِ تَنْزَلُهَا عَلَيْكَ بِالْحَقِّ
وَإِنَّكَ لَمِنَ الْمُرْسَلِينَ ﴿٥٧﴾

253. kuwaasu waa Rasuuladi Waana ka fadilnaa qaarkood qaarka (kale) waxaa ka mid ah kuwo uu la hadlay Eebe, wuuna koryeelay qaarkood darajooyin, waxaana siinay Ciise Binu Maryama

﴿ تِلْكَ الرُّسُلُ فَضَّلْنَا بَعْضَهُمْ عَلَى بَعْضٍ مَّنْ
كَلَّمَ اللَّهُ وَرَفَعَ بَعْضَهُمْ دَرَجَاتٍ وَءَاتَيْنَا دَاوُدَ
ابْنَ مَرْيَمَ الْبَيْتَ وَأَيَّدْنَاهُ بِرُوحِ الْقُدُسِ وَلَوْ

xujooyin, Waxaana ku xoo jinay ruux-dii dahirka ahayd Malaku Jibriil, haduu Ebe doono ismalaayeen kuwii ka dambeeyay intay u timid xujooyin kadib, laakiin way is khilaafeen waxaa ka Midah mid rumeeyay (xaqa) waxaana kamidah mid ka gaaloobay, haduu Ebe doonana isma laayeen. Laakiin Eebe wuxuu falaa wuxuu doono.

شَاءَ اللَّهُ مَا أَقْتَلَ الَّذِينَ مِنْ بَعْدِهِمْ مِنْ بَعْدِ مَا
جَاءَهُمْ الْبَيِّنَاتُ وَلَكِنْ اٰخْتَلَفُوا فِيْهُمْ مَنْ
ءَامَنَ وَمِنْهُمْ مَنْ كَفَرَ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا أَقْتَلُوا
وَلَكِنْ اللَّهُ يَفْعَلُ مَا يُرِيدُ ﴿٢٥٢﴾

Waxay ku tusin aayaddu sugnaanshaha Mu'miniinta iyo sida Eebe ugu gargaaray, Nabi Daa wuudna u sharrifay una dilay Jaalud, xigmada Eebana waxaa ka mid ah in qaarkood qaar lagu celiyo, Rassuulada Eebana qaarbaa qaar ka fadilan, sida Nabiga Muxamed ah iyo Nabi Muuse iyo Nabi Ciise. Al-Baqarah (250-253).

254. kuwa (xaqa) rumeeyow nafaqeeya (bixiya) waxaan idinku arzuqnay qaar-kood ka hor Imaatin maalin (Qiyaama-da) oon gadasho jirin iyo saaxiibtinimo iyo shafeeco (midna) Gaaladuna iyaga unbaa daalimiin ah.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا أَنْفُوعًا وَمِمَّا رَفَعْنَاكَ مِنْ قَبْلِ
أَنْ يَأْتِيَ يَوْمَ لَا بِنِعْمٍ فِيهِمْ وَلَا خُلَّةٌ وَلَا شَفِيعَةٌ
وَالْكَافِرُونَ هُمْ الظَّالِمُونَ ﴿٢٥٤﴾

255. Allaah, ku xaq lugu caabudo ma jiro oon isaga ahayn, waana Eebaha Nool, Khalqigana maamula, Ma qabato Lulmo iyo hurdo (midna) wuxuuna iska leeyahay waxa Samooyinka ku sugan iyo Dhulka, waa kuma kan ka shafeeci agtiisa (Eebe) idankiisa mooyee, wuxu ogyahay (Eebe) waxa Dadka hortooda ah iyo waxa ka dambeeya mana koobaan wax Cilmigiisa ah, wuxuu Eebe doono mooyee, wuuna u waasacnoqday kursigiisu Samaawaadka iyo Dhulka, mana Cusleeyo ilaalinteedu, Eebana waa sarreeye wayn.

اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ لَا تَأْخُذُهُ سِنَّةٌ
وَلَا نَوْمٌ لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ مَنْ
ذَٰ الَّذِي يَشْفَعُ عِنْدَهُ إِلَّا بِإِذْنِهِ يَعْلَمُ مَا بَيْنَ
أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلَا يُحِيطُونَ بِشَيْءٍ مِنْ عِلْمِهِ
إِلَّا بِمَا شَاءَ وَسِعَ كُرْسِيُّهُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ
وَلَا يَئُودُهُ حِفْظُهُمَا وَهُوَ الْعَلِيُّ الْعَظِيمُ ﴿٢٥٥﴾

Aayadda hore waxay sugi inay habboontahay in wax wanaagsan la hormarsado Qiyaame ka hor'maxaayecay waa Maalinaan Ganacsi iyo Saaxiibtinimo iyo Shafeeco midna jirin Cid Eebe shafeeco u idmo mooyee, Gaalana iyaga unbaa daalimiin ah, tan kale Aayadda dambe waxaa la dhahaa aayatulkursi waxayna ka mid tahay aayadaha Quraakna u weyn, waxaana fadligooda ku soo arooray Xadiithyo badan waxaana ka mid ah. In Nabigu warsaday Ubayi Binu Kacab aayadde u weyn Quraanka oo uu yidhi: Eebe iyo Rasuulkiisa og markuu ku Cel celiyeyna uu yidhi: Aayatul kursi, markaas Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi ha kuu shifoobo Cilmigu abaa Mundirow. Waxaa wariyey Imaam Axmed..

Waxayna kulansatay aayaddu Toban arrimood oo Muhiim ah oos garan Ciddii aad u fiirisa oo fahmida. Al-Baqarah (254-255).

256. Igraah (Qasab) ma aha Diinta galideedu, Hanuunku (Iimaanku) waa ka cadaaday (soocanyahay) Baadida (Gaalnimada) ruuxiise diida Dhaaqaat (shayaadiinta iyo xuma fare wixii ah) oo rumeeya Eebe wuxuu qabsaday xadhig (guntay) sugan oo adag (Islaamka) oon go'ayn, Eebana waa maqle og.

257. Eeba waa u gargaaraha kuwa rumeeyey xaqa, wuxuuna ka bixiyaa mugdiga (Gaalnimada) una bixiyaa Nuurka (iimaanka), kuwa Gaaloobayna gargaarhoodu waa Dhaaqaat (Xumaan fare) wuxuuna ka bixiyaa Nuurka una bixiyaa Mugdiga (Gaalnimada) kuwaasina waa ehelka Naarta wayna ku waari dhexdeeda.

258. ka warran (warkiisu ma ku soogaadhay) kii kula murmay Nabi Ibraahim Eebihis, (waa Namruud) in Alle Siiey xukun darteed markuu Nabi Ibraahim yidhi Eebhay waa Nooleeye Dile, markaa yidhi (Gaalkii) amba waan nooleeyaa oon dilaa, markaas Nabi Ibraahim yidhi Eebe wuxuu ka keeni Qoraxda Bari ee ka keen Galbeed, markaasaa la wareeriyey (oo aamusay) kii gaaloobay, Eebana ma hanuuniyo Qoom daalimiin ah.

لَا أَكْرَاهُ فِي الدِّينِ قَد تَبَيَّنَ الرُّشْدُ مِنَ الْغَيِّ فَمَنْ يَكْفُرْ بِالطَّاغُوتِ وَيُؤْمِنْ بِاللَّهِ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ بِالْعُرْوَةِ الْوُثْقَىٰ لَا انفِصَامَ لَهَا وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٥٦﴾

اللَّهُ وَلِيُّ الَّذِينَ آمَنُوا يُخْرِجُهُم مِّنَ الظُّلُمَاتِ إِلَى النُّورِ وَالَّذِينَ كَفَرُوا أُولَئِكَ لَهُمُ الظُّلُمَاتُ يُخْرِجُهُم مِّنَ النُّورِ إِلَى الظُّلُمَاتِ أُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٢٥٧﴾

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ حَاجَّ إِبراهيمَ فِي رَبِّهِ أَنْ آتَاهُ اللَّهُ الْمُلْكَ إِذْ قَالَ إِبراهيمُ رَبِّيَ الَّذِي يُبْعَثُ قَالَتْ أَنَا مَحْيَىٰ وَأَمِيتٌ قَالَ إِبراهيمُ فَإِنَّ اللَّهَ يَأْتِي بِالسَّمْسِ مِنَ الْمَشْرِقِ فَأْتِ بِهَا مِنَ الْمَغْرِبِ فَبُهِتَ الَّذِي كَفَرَ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴿٢٥٨﴾

Cidna xoog iyo Qasab Diinta Qalbigiisa laguma galiyo illeen Xaqu waa Cadyahaye, ruuxiise raaca Diinta Islaamka ee Xaqa ah wuxuu qabsaday Xadhig adag oon go'ayn Eebana waa gargaaraha Mu'miniinta hanuuniyana, Shaydaanna waa gargaaraha Gaalada, sida Namruudkii la dooday Nabi Ibraahim markuu kibray oo isla weynaaday sheegtayna awood markii dambase Ceeboobay oo Wareerey oo Hadli waayey, saasina waa Caadada Gaalada iyo Xumaan farayaasha, wax nooleys iyo Dilse ma aha wuxuu sheegtay oo ah inuu labo nin Midna Gawraco midna siidaayo, Ciddii awood ku faanta wax ha ka badasho Xukunka Eebe iyo Khaligiiisa, Mana jirto. Al-Baqarah (256-258).

259. ka warran kii maray magaalo iyadoo la duntay darbigeedii (oo cidla ah) markaas yidhi sidee Eebe u nooleyn

أَو كَالَّذِي مَرَّ عَلَى قَرْيَةٍ وَهِيَ خَاوِيَةٌ عَلَى عُرُوشِهَا قَالَ أَنَّى يُحْيِي هَذِهِ اللَّهُ بَعْدَ مَوْتِهَا فَأَمَاتَهُ اللَّهُ

midan dhimasho (kharaab) kadib markaasaa Eebe dilay Boqol Sano (qadarkeed) markaasuu soo bixiyey wuxuuna ku yidhi imisaad nagaatay adigoo mayd ah, uuna yidhi waxaan nagaaday maalin ama maalin qaarkeed, uu kuna yidhi (Eebe) waxaad nagaatay Boqol sano : ee day Cuntadaada iyo Cabidaada, oon doorsoomin, day Dameerkaaga waxaan kaaga yeeleyna calaamo Dadka, day Lafaha sidaan u sookoryeeleyno (u nooleyn) una huwinayno Hilib markuu u cadaaday xaalku wuxuu yidhi waxaan ogahay in Eebe wax walba karo.

مِائَةً عَامٍ ثُمَّ بَعَثَهُ قَالَ كَمْ لَيْتَ قَالَ لَيْتَ
يَوْمًا أَوْ بَعْضَ يَوْمٍ قَالَ بَلْ لَيْتَ مِائَةً عَامٍ
فَأَنْظِرْ إِلَىٰ طَعَامِكَ وَشَرَابِكَ لَمْ يَسْتَنَّهٗ وَأَنْظِرْ إِلَىٰ
حِمَارِكَ وَلِنَجْعَلَكَ آيَةً لِّلنَّاسِ وَأَنْظِرْ إِلَىٰ
أَعْيُنِنَا لَنْ نَسُوهَا لَٰحِمًا فَلَمَّا تَبَيَّنَ لَهُ قَالَ أَعْلَمُ أَنَّ اللَّهَ عَلَىٰ
كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٥٦﴾

Waxaa la wariyey in Nin la dhihi jirey Cuzayr uu maray Magaalada Baytul Maqdis oo la kharriibay, markaas yidhi sidee Eebe u noolayn Kharaab kadib, markaas Eebe dilay soona nooleeyey mudo kadib, tusayna Quद्रada Eebe iyo siduu wax u nooleeyo, Awooda Eebana ma aha wax la shakiyo ama lafogeysto, Cidda Xaqa rumeysana waxaa looga baahanyahay u hogaansanka Eebe kor iyo Hoosba illeen waa wax walba karee. Al-Baqarah (259).

260. Xusuuso markuu yidhi Nabi Ibraahim Eebow i tusi sidaad u nooleyso waxa dhinta uuna yidhi miyaadan rumeynin (Xaqa) oo uu yidhi waan rumeeyey laakiin (waxaan doonay) inuu xasilo qalbigaygu markaas (Eebe) yidhi qaad afar shimbirood una iil xagaaga (JarJar) kadibna yeel Buur kasta qayb ka mid ah, markaas u yeedh waykuu imaan iyagoo ordi, ogoowna in Eebe adkaade Falsan yahay.

وَإِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ رَبِّ أَرِنِي كَيْفَ تُحْيِي الْمَوْتَىٰ
قَالَ أَوَلَمْ تُؤْمِنْ قَالَ بَلَىٰ وَلَٰكِن لِّيَظْمِنَ قَلْبِي قَالَ
فَخُذْ أَرْبَعَةً مِّنَ الطَّيْرِ فَصُرْهُنَّ إِلَيْكَ ثُمَّ اجْعَلْ
عَلَىٰ كُلِّ جَبَلٍ مِّنْهُنَّ جُزْءًا ثُمَّ ادْعُهُنَّ يَأْتِينَكَ
سَعْيًا وَاعْلَمْ أَنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٦٠﴾

261. kuwa ku bixiya Xoolahooda Jidka Eebe waxay la midyihiin Xabbaad (Masago ah) oo bixisay Todobo Sabuul, Sabuul kastana bixiyey Boqol xabbo Eebe waa u Laab laaba (Ajirka) Cidduu doono Eebana waa Deeq badane og.

مَثَلِ الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالِهِمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ كَمَثَلِ
حَبَّةٍ أُنْثِيَتْ سَبْعَ سَنَابِلٍ فِي كُلِّ سُنْبُلَةٍ مِائَةٌ
حَبَّةٌ وَاللَّهُ يُضَاعِفُ لِمَن يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ
عَلِيمٌ ﴿٢٦١﴾

Nabi Ibraahim wuu rumeysnaa awooda Eebe wuxuuse u warsaday xaalkaas in Iimaanku u sii kordho, mase aha shaki siduu Nabiguba yidhi (Naxriis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeele) anagaa ka mudan Shaki (Nabi) Ibraahim markuu yidhi Eebow i tus saad wax u nooleyso. Bukhaari iyo Muslim baa wariyey. tan kale cidda wax wanaagsan hor marsata Eebe wuu u laab laabi ajirka sida xabbaad Masago ah oo dhulka lagu riday oo soobixisa Sabuullo badan, waxaana Xadiith ku sugnaaday Ciddii

ku baxsata nafaqo dheeraad ah Jidka Eebe waxaa loo laablaabi illa todobo boqol oo jeer. Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi : Jahaadka iyo Xajku waxay dirhamka u laablaabaan ilaa Todobo Boqol oo jeer. Al-Baqarah (260-261).

262. kuwa ku bixiya Xoolahooda Jidka Eebe markaasna raacinin waxay bixiyeen Manno iyo dhib waxay ku mudan ajrigooda Eebahood agtiisa, Cabsina korkooda ma ahaato, mana murugoon.

الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ثُمَّ لَا
يَتَّبِعُونَ مَا أَنْفَقُوا مَنًّا وَلَا أَذَىٰ لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ
رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٣٢﴾

263. hadal wanaagsan iyo dhaafid (Saamaxaad) yaa ka khayr badan Sadaqo uu raaco dhib, Eebana waa hodan dulbadan.

*قَوْلٌ مَّعْرُوفٌ وَمَغْفِرَةٌ خَيْرٌ مِّنْ صَدَقَةٍ
يَتَّبِعُهَا أَذَىٰ وَاللَّهُ عَنَىٰ حَلِيمٌ ﴿٣٣﴾

264. kuwa xaqa remeeyow ha ku burinina sadaqadiina Manno iyo dhib sida kan u bixiya xoolihiisa istuska Dadka, oo aan rumeynin Eebe iyo Maalinta aakhiro, wuxuuna la mid yahay sida Sallax korkiisa Carro tahay oo roob badan heley oo ka tagtay isagoo sibibiq ah (madhan) ma karaan kuwaasu wax ka mid ah waxay kasbaadeen (ajri kamahelaan) Eebana ma hanuuniyo Qoom gaalo ah.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَبْطُلُوا صَدَقَتِكُمْ بِالْمَنِّ
وَالْأَذَىٰ كَالَّذِي يُنْفِقُ مَالَهُ رِثَاءَ النَّاسِ وَلَا يُؤْمِنُ
بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَمَثَلُهُ كَمَثَلِ صَفْوَانٍ عَلَيْهِ
تُرَابٌ فَأَصَابَهُ وَابِلٌ فَتَرَكَهُ صَلْدًا لَا يَقْدِرُونَ عَلَىٰ شَيْءٍ
مِّمَّا كَسَبُوا وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ ﴿٣٤﴾

Wax bixinta iyo sadaqadu waa waxyaalaha waaweyn ee Diinta Islaamku Fartay, hasa yeeshee waa inaan sheeg sheeg iyo ku maneysi la raacinin, Sadaqaduna mar haday tahay dar Eebe oo istustus iyo dhib loo bixinin abaalkeedu waa Cabsi iyo Murugla'aan, haddaadan waxbixineynina waxaa wanaagsan hadal fiican istustusna cidhibtiisu waa wax la'aan, Nabiguna (Naxaris iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi : Ma galo Jannada Caaqa (caasiga Waalidka) iyo ka wax ku manaysta (Dadka) iyo Khamri daa'ime, iyo beeniyaha Qaddarka (Eebe) Waxaa wariyey Imaam Axmed. Al-Baqarah (262-264).

265. kuwa ku bixiya Xoolahooda doonida raalli ahaanshaha Eebe iyo yaqiinsi naftooda (Khayrka) waxay la midyihiin Beer ku taal meelsare oo uu helay Roob badan, oo markaas keentay Cunadeedii Laban laab, hadduusan Roob – badan helinna uu helo Roob yar (Shuux) Eebana waxaad Camalfalaysaan wuu arkaa.

وَمَثَلِ الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمُ ابْتِغَاءَ
مَرْضَاتِ اللَّهِ وَتَتَّبِعَتْنَا مَنَ أَنفُسِهِمْ كَمَثَلِ جَنَّمٍ
يَرْتَوَىٰ وَأَصَابَهَا وَابِلٌ فَتَمَاتَ أَكْطَافُهَا ضِعْفَيْنِ
فَإِن لَّرُضِيبًا وَأَبِلٌ فَطَلُّ وَاللَّهُ يَمَّا تَعْمَلُونَ
بَصِيرٌ ﴿٣٥﴾

266. ma jecelyahay midkiin inay u

أَيُّودٌ أَحَدُكُمْ أَن تَكُونَ لَهُ جَنَّةٌ مِّن نَّحِيلٍ

ahaato Beer Timir iyo Canabyo ah oy dareeri dhexdeeda Wabiyaal oos ku leeyahay dhexdeeda wax kastoo Midho ah ayna hayso Da'weyni uuna leeyahay Caruur tabaryar oo markaas beertii Asiipto (ku dhacdo) Dabayl daran oo dab wadata oo Gubatay Beertii, Saasuu Eebe idiinku cadeeyaa aayaadkiisa si aad u fikirtaan.

وَأَعْتَابِ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ لَهُ فِيهَا مِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ وَأَصَابَهُ الْكِبَرُ وَلَهُ ذُرِّيَّتٌ ضَعِيفَةٌ فَآصَابَهَا عِصَابٌ بِفَيْءٍ نَارًا فَاحْتَرَقَتْ ذَلِكَ يَبِينُ اللَّهُ لَكُمْ الْآيَاتِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٦٧﴾

Dar Eebe oo wax loobixiyo waxay labanlaabtaa Camalka ajrigiisa, istus tuska iyo niyo xumiduna waxay gubtaa Camalka sida beerta aayaddu tilmaantay iyo siduu ugu baahanyahay Ninkii lahaa, waxaana sugnaatay in Macnaha aayaadan Cumar warsaday Asaxaabtii oy dhaheen Eebaa og, oos cadhooday yidhina dhaha ma naqaan ama waan naqaanaa'markaas Ibnu Cabbaas yidhi : Waa ruux camal fiican falay oo Shaydaan duufsaday. Waxaa wariyey Bukhaari. Al-Baqarah (265-266).

267. kuwa xaqa rumeeyow wax ka bixiya ka wanaagsan waxaad kasbaateen, iyo waxaan idinka soo bixinay Dhulka, hana u qasdina kan xun inaad wax kabixinsaan, oo idinkuba aydaan qaadateen, inaad indho laabtaan mooyee, ogaadana in Eebe yahay Hodan la mahdiyo.

يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَنْفِقُوا مِنْ طَيِّبَاتِ مَا كَسَبْتُمْ وَمِمَّا أَخْرَجْنَا لَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ وَلَا تَيَمَّمُوا الْخَبِيثَ مِنْهُ تُنْفِقُونَ وَلَسْتُمْ بِكَافِرِينَ إِلَّا أَنْ تُغْمِضُوا فِيهِ وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ عَنِّي حَمِيدٌ ﴿١٦٨﴾

268. Shaydaanku wuxuu idiin yaboohi Faqri, wuxuuna idin fari xumaan, Eebana wuxuu idiinyaboohi dambi dhaaf iyo Fadli, Eebana waa waasac (Deeqdiisu) waxna og.

الَّذِينَ يُعَدُّوكم الْفَقْرَ وَيَأْمُرُكُمْ بِالْفَحْشَاءِ وَاللَّهُ يُعَدُّكُمْ مَغْفِرَةً مِنْهُ وَفَضلاً وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلِيمٌ ﴿١٦٩﴾

269. wuxuu siiyaa xigmo ciddu doono, ruuxii la siiyo xigmona waxaa la siiyey khayr Badan, wax waantooba oon kuwa Caqliga leh ahayna majiro.

يُؤْتِي الْحِكْمَةَ مَنْ يَشَاءُ وَمَنْ يُؤْتَ الْحِكْمَةَ فَقَدْ أُوتِيَ خَيْرًا كَثِيرًا وَمَا يَدْرُكُهُ إِلَّا الْأُولُو الْأَلْبَابِ ﴿١٧٠﴾

Aayaddan waxay fari in xoolaha xalaasha ee fiican wax laga bixiyo, oon ka xun loo soocin bixin iyo Shaydaanku ku cabsigalin Dadka Baahi iyo Faqri, Eebana u yaboohi dambi dhaaf iyo dhacraad, ciddu doonana uu siin caqli iyo xikmad uu wanaagga ku raaco, waana khayr iyo sharaf wayn, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi : Eebe wuxuu idiin qaybiyey Akhlaaqda siduu idiin ku qaybiyey Arzaaqa, Eebana wuu siiyaa adduun ruuxuu jecel yahay iyo miduusan jecel ynba, mase siiyo Diinka miduusan jecel yn, ruuxuu siiyo Diin wuu jecel aday... intuu ka dhaho, Ruuxii ka bixiya xaaraam, ama sadaqeyaa lama aqbalo, haduu ka tagana wuxuu ku noqon Shay Naareed. Waxaan wariyey Imam Axmed. Al-Baqarah (267-269).

270. waxaad bixisaan oo nafaqo ah (sadaqo) amaad ku nadartaan oo nadar

وَمَا أَنْفَقْتُمْ مِنْ نَفَقَةٍ أَوْ نَذَرْتُمْ مِنْ نَذْرٍ

ah Eebe waa ogyahay, daalimiinna gargaare uma sugnaanin.

271. haddaad muujisaan Sadaqaadka waa fiicantahay, haddaadse qarisaan ood siisaan fuqarada yaa idiin khayr badan, wuuna asturi Eebe xumaantiina (Dambiga) Eebana waxaad falaysaan wuu ogyahay.

272. korkaaga ma saarra hanuunintoodu, Eebaase hanuuniya cidduu doono, waxaad bixinaysaan oo khayr ah naftiinaa iska leh, umana bixisaan doonid Waji Eebe mooyee, waxaad bixisaan oo khayr ahna waa laydiin oofin, idinkoon laydin dulmiyeyn.

Wixii Sadaqa ah oo la bixin ama wixii lagu nadro iyo camal walba Eebe waa ogyahay, muujinta Sadaqa iyo Qarinteeduba waa banaantahay, waxaase khayr badan Qarinteeda, hanuunkana Eebaa haysta 'Nabigana waxaan gaadhsiiis ahaayn ma saarro wixii dar Eebe loobixiyaana Eebe wuu ka abaalmarin,"waxaana Todobada la hadhayn ka mid ah Ciddii sadaqo qarsoon bixisa".
Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Al-Baqarah (270-272).

273. (waxaa muta Sadaqadaas) fuqarada lagu koobay Jidka Eebe (Jahaadka) oon karin inay dhulka ku safraan, wuxuna u malayn kaan ogayn Hodan dhawrsanaantooda darteed, waxaadse ku garan Calaamadooda, umana waydiiyaan Dadka ku celcelin, waxaad bixisaan oo khayr ah Eebe waa ogyahay (oo ka jasaan).

274. kuwa bixiya Xoolahooda Habeen iyo Dharaarba qarsoodi iyo muuqaalba waxay ku mudan ajirkooda Eebahood agtiis, Cabsina korkooda ma ahaato iyo murug midna.

Wax bixintu waa lagama maarmaan, Waajib ahaatayaa iyo siin kale ahaatayaaba, adaygeeda iyo ahmiyadeeda darteed ayuu Quraanku wax badan soo celceliyey, Nabiguna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) dhawx badan u faray uguna hanuuniyey, taasiina waxay ku tusin in Diinta Islaamku tahay Diin xidhiidhin iyo taakulayn, sida Fuqarada aan Shaqaynayn, ee Jidka Alle ku Jahaadi, cidna wax warsanin loona malaynayn Fuqaro, oyse ka muuqato dhibaato, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi : ruuxii is dhawra Eebaa dhawra, ruuxii is hodanyeelana Eebaa hodmiya, ruuxii wax waydiista isagoo hanta wax la eg Shan Wiqiyadoodna

قَاتَ اللَّهُ يَعْلَمُهُ، وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ أَنْصَارٍ ﴿٢٧١﴾

إِنْ شُدُّوا الصَّدَقَاتِ فَعِمَاهُمْ وَإِنْ تُخْفُوها وَتُؤْوِها الْفُقَرَاءَ فَهُوَ خَيْرٌ لَكُمْ وَيُكَفِّرُ عَنْكُمْ مِنْ سَيِّئَاتِكُمْ وَاللَّهُ يَمَّا تَعْمَلُونَ خَيْرٌ ﴿٢٧٢﴾

لَيْسَ عَلَيْكَ هُدَاهُمْ وَاللَّيِّنُ اللَّهُ يَهْدِي مَنْ يَشَاءُ وَمَا تُنْفِقُوا مِنْ خَيْرٍ فَلَا يُفْسِدْهُمَا وَمَا تَنْفِقُونَ إِلَّا ابْتِغَاءَ وَجْهِ اللَّهِ وَمَا تُنْفِقُوا مِنْ خَيْرٍ نُوفٍ إِلَيْكُمْ وَأَنْتُمْ لَا تُظْلَمُونَ ﴿٢٧٣﴾

لِلْفُقَرَاءِ الَّذِينَ أَحْصَرُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ لَا يَسْتَطِيعُونَ ضَرْبًا فِي الْأَرْضِ يَحْسَبُهُمُ الْجَاهِلُ أَغْنِيَاءَ مِنَ التَّعْقُفِ تَعْرِفُهُمْ بِسِيمَاهُمْ لَا يَسْأَلُونَ النَّاسَ إِلْحَاقًا وَمَا تُنْفِقُوا مِنْ خَيْرٍ قَاتَ اللَّهُ بِهِ عَلَيْهِمْ ﴿٢٧٤﴾

الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ بِالْإِثْلِ وَالنَّهَارِ سِرًّا وَعَلَانِيَةً فَلَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٢٧٥﴾

wuxuu u waydiiyey Dadka Cel celin. Waxaa weriyay Imaan Axmed. Al-Baqarah (273-274).

275. kuwa Cuna Ribada kama istaagaan (Qubuurahooda) siduu u istaago mid la dhici Shaydaan taabashadiis mooyee, waxaana ugu wacan arrintaas inay dhaheen Beecu (Gadashadu) waa sida Ribada, Wuu baneeyey Eebe Beeca (Gadashada) wuxuuna xarrimay Ribada, ruuxuu u yimaado waano Eebihis oo reebtooma wuxuu mudan wixii horeeyey, amarkiisana waxaa (loo bandhigi) Eebe, ruuxiise ku noqda (Ribada) kuwaasu waa asaxaabta (chelka) Naarta wayna ku waari dhexdeeda.

الَّذِينَ يَأْكُلُونَ الرِّبَا لَا يَقُومُونَ إِلَّا كَمَا يَقُومُ
الَّذِي يَتَخَبَّطُهُ الشَّيْطَانُ مِنَ الْمَسِينِ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَالُوا
إِنَّمَا الْبَيْعُ مِثْلُ الرِّبَا وَأَحَلَّ اللَّهُ الْبَيْعَ وَحَرَّمَ
الرِّبَا فَمَنْ جَاءَهُ مَوْعِظَةٌ مِنْ رَبِّهِ فَانْتَهَى فَلَهُ
مَاسَلَفٌ وَأَمْرُهُ إِلَى اللَّهِ وَمَنْ عَادَ فَأُولَئِكَ أَصْحَابُ
النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٢٧٥﴾

276. wuxuu tiraa Eebe Ribada wuxuuna badiyaa (barakeeyaa) Sadaqooyinka, Eebana ma jecla Gaalnimo badane Dambi badan Dhammaantiis.

يَمْحَقُ اللَّهُ الرِّبَا وَيُزِيلُ الصَّدَقَاتِ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ كُلَّ
كَفَّارٍ آثِمٍ ﴿٢٧٦﴾

Diinta islaamku wa Diin fari Xalaal Cunka, Shaqada Fiican iyo istaakulaynta, mana ogola xaaraan Cunka, iskhayaamidda iyo dulmiga, Ribaduna waa Xoolaha Dadkoo xaq darro iyo dulsaar lagu Cuno, waxaana lagu Ciqaabi Dhidhidida sida ruux waalan Qiyaamada, Cadaab iyo barako darro, illeen Eebe kala gadashadu baneeyaa, Ribadana wuu xarimaa, mana aha siday Gaaladu sheegeen in Beeca iyo Ribadu isku midyihiin. Rassulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi : Waxaan u imid Habeenkii lay dheelmay Qaar Calxooshoodu tahay sida Guryo oo Abeesana dhexsocoto, waxaana dhahay waayo kuwaasi Jibriilow wuxuu yidhi : Kuwaasi waa kuwa Cuna ribada. Waxaa wariyey Imaan Axmed.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi : Kuwa Cuna Ribada waxaa la soo bixiyaa Qiyaamada iyagoo Waalan oo Neefaysan. Al-Baqarah (275-276).

277. kuwa rumeeyey xaqa, oo Camalfiican falay, oo Oogay Salaadda, oo Bixiyey sakada waxay ka mudan ajirkooda Eebahood agtiisa, wax cabsi ah iyo murugana korkooda ma ahaato.

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَأَقَامُوا
الصَّلَاةَ وَءَاتَوْا الزَّكَاةَ لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ
وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٢٧٧﴾

278. kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada Eebe kana taga waxa hadhay oo Ribo ah haddaad Mu'mintihiiin.

يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَذَرُوا مَا بَقِيَ مِنَ
الرِّبَا إِن كُنتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿٢٧٨﴾

279. haddaydaan falin (sidaas) ogaada Dagaal Eebe iyo Rassulkiisa, haddaad Toobad keentaanna waxaad leedihiin

فَإِن لَّمْ تَقْعَلُوا فَاذْنُوا بِحَرْبٍ مِنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ
وَأَن تَبْشُرُوا فَلَآ أَفْئَةٌ عَلَيْنَا لَأَنْظَلِمُنَّ

Raasamaalkii Xoolihiina, wax dulmin-maysaan idinna laydin ma dulmayo.

وَلَا تَظْلَمُونَ ﴿٧١﴾

280. haddii la helo isagoo caydh ah (kan wax laguleeyahay) ha la sugo intay uga fududaato, haddaad sadaqaysataan (ka saamaxdaan) yaa idiin khayr badan haddaad ogtihiin.

وَإِنْ كَانَ ذُو عُسْرَةٍ فَنَظِرَةٌ إِلَىٰ مَيْسَرَةٍ ۗ وَإِنْ جَاءَكَ عِتْقٌ مِنْ رَبِّكَ فَاتَّقِ اللَّهَ ۚ إِنَّكَ كُنْتَ تَعْلَمُونَ ﴿٧٢﴾

281. kana dhawrsada Maalinta laydiin soo celin Eebe, kadibna qof walba loo oofin waxay kasbatay, lamana dulmiyo.

وَأَقْرَبُ أَيَّامٍ مَّا رَجَعُونَ فِيهِ إِلَىٰ اللَّهِ ثُمَّ تَوَفَّىٰ كُلُّ نَفْسٍ مَّا كَسَبَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٧٣﴾

Ciddii xaqa rumeysa oo camalfican la timaada, Salaad'Zako iyo Wanaaga kalaba wuu ka helaa abaalkiisa fiican Eebe agtiisa, isagoon Cabsi iyo murugo arkayn Ribadana saan horay u soo sheegnay waa camal xun iyo kasab xaaraan ah'mudanna in laga dheeraado, ciddii fashana ha u darbado dagaalka Eebe iyo Rasuulkiisa, maxaadse u malayn cid Eebe iyo Rasuulkiisu la dagaalameen.

Ibnu Cabbas wuxuu sheegay in kan cuna Ribada lagu dhihi Qiyaamada : u qaado hubkaaga Dagaal Alle. Ribaduna waa irrido badantahay, waana masalooyinka aad u adag oy waajibtahay daadaal iyo ka fogaanta shakiga, waana in loo naxariisto cidda Daynta qabta ee faqiirka ah'intuu ka helana la sugo ama laga saamaxo, iyadoo loo darban Qiyaamada illeen Eebaa loo noqone cid kastana ka abaalmarin wuxuu kasbaday isagoon ladulmiyeyn. Al-Baqarah (277-281).

282. kuwa xaqa rumeeyow haddaad wax kala Daysataan tan iyo muddo magacaaban qora hana idiin kala qoro dhexdiina qof si Cadaalad ah, yuuna diidin Qore inuu u qoro siduu wax u baray Eebe, ha qoro hana u yeedhiyo kan xaqa lagu leeyahay, hana ka dhawrsado Eebe, yuuna wax ka nuq-saaminin hadduu yahay kan xaqa lagu leeyahay safiih ama tabaryare ama uusan karin inuu yeedhiyo ha u yeedhiyo Waligiisu si Caddaalad ah, maragana ka yeela Laba marag oo Rag ah, haddaan laba Nin la helinna Nin iyo Laba haweenood ka raalli tihii marag ahaan (laga yaabo) inay midi halmaanto oo tankale Xusuusiso, yeyna diidin maragu haddii loo yeedho, hana ka daalina inaad qortaan wax yar iyo wax waynba tan iyo mudadiisa, saasaa ku cadaalad badan Eebe agtiisa una sugan maragga una dhaw inaan la shakiyin,

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا تَدَايَنْتُمْ بِدِينٍ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى فَاكْتَسِبْتُمْ بَيْنَكُمْ كَاتِبٌ بِالْعَدْلِ وَلَا يَأْتِبْ كَاتِبٌ أَنْ يَكْتُبَ كَمَا عَلَّمَهُ اللَّهُ فَلْيَكْتُبْ وَلْيُمْلِلِ الَّذِي عَلَيْهِ الْحَقُّ وَلْيَتَّقِ اللَّهَ رَبَّهُ وَلَا يَبْخَسْ مِنْهُ شَيْئًا فَإِنْ كَانَ الَّذِي عَلَيْهِ الْحَقُّ سَفِيهًا أَوْ ضَعِيفًا أَوْ لَا يَسْطِيعُ أَنْ يُمْلَ هُوَ فليُمْلِلِ وَلِيُّهُ بِالْعَدْلِ وَأَسْتَشْهِدُوا شَهِيدَيْنِ مِنْ رِجَالِكُمْ فَإِنْ لَمْ يَكُونَا رَجُلَيْنِ فَرَجُلٌ وَامْرَأَتَانِ مِمَّنْ تَرْضَوْنَ مِنَ الشُّهَدَاءِ أَنْ تَضِلَّ إِحْدَاهُمَا فَتُذَكَّرَ إِحْدُهُمَا الْأُخْرَىٰ وَلَا يَأْتِبِ الشُّهَدَاءُ إِذَا مَا دُعُوا وَلَا تَسْمَعُوا أَنْ تَكْفُمُوا صَغِيرًا أَوْ كَبِيرًا إِلَىٰ أَجَلِهِ ۚ ذَٰلِكُمْ أَنْقَضَ عِنْدَ اللَّهِ وَأَقُومُوا لِلشُّهَادَةِ وَأَدِّقُوا لَاتَرْتَابُوا إِلَّا أَنْ تَكُونَ تِجْرَةً حَاضِرَةً لِذِي رُءُوسٍ بَيْنَكُمْ فَلَيْسَ

inay tahay Tijaara (Ganacsi) joogta aad maamulaysaan dhexdiina oo korkiina dhib (Dambi) ma aha inaydaan qorin, Marag u yeela haddaad wax kala Gadanaysaan, yaana la dhibin Qore iyo Marag midna, haddaad fashaan waa faasiqnimadiina, ka dhawrsada Eebe waxna wuu idin bariye, Eebana wax kasta waa ogyahay.

عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَلَّا تَكْتُمُوا مَا أَشْهَدُوا
 إِذَا تَبَايَعْتُمْ وَلَا بَيْعًا كَاتِبًا وَلَا شَهِيدًا وَإِنْ
 تَقَمَّلْتُمْ فَلِيَئَمْ رُفُوسٌ بِكُمْ وَأَنْتُمْ بِاللَّهِ
 وَيَعْلَمُ اللَّهُ وَاللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ
 عَلِيمٌ ﴿٢٨٢﴾

Aayadan waa aayad wayn, waxayna faraysaa in laqoro wixii lakala daynsan, Maragna loo yeelo, si caddaalad loo gaadho wax shaki ahna u dhicin'waxay kaloo fari in Maragga'Qoraha iyo kan Daynta qaadanba Dhabta iyo Caddaalada ku dadaalaan, wax dhib ahna aan laysu gaysan, haddii cidna Daynta qabta wax yeedhin waayo yari ama Safiinnimo ama tabaryari awgeed waxaa Tawallin Waligiisa, waxaa sugnaatay in Nabigu galay Magaalada Madiino iyagoo isu hor marin wuxuuna yidhi : Ciddii salaf hormarin samaysa ha ku hor mariso beegid la yaqaan iyo miisaan layaqaan tan iyo muddo la yaqaan. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Al-Baqarah (282).

283. haddaad safartihin oydaan helin Qore rahan la qibloodo (la kala qaato ha badasho qoridda) haduu qaarkiin aaminay qaar ha siiyo kii la aaminay aamaanadiisa hana ka dhawrsado Eebihiisa barbaariyey, hana qariniina maragga, ruuxii qariyana wuu dambaabi Qalbigiisu'Eebena waxaad camalfashaan waa ogyahay.

﴿ وَإِنْ كُنْتُمْ عَلَىٰ سَفَرٍ وَلَمْ تَجِدُوا كَاتِبًا فَرِهَانَ
 مَقْبُوضَةٍ فَإِنْ أَمِنَ بَعْضُكُمْ بَعْضًا فَلْيُؤَدِّ الَّذِي
 أُؤْتِمِنُ أَمْنَتَهُ وَيَأْتِيَنَّ اللَّهَ رِيبَهُ. وَلَا تَتَسَوَّأُوا
 الشَّهَادَةَ وَمَنْ يَكْتُمْهَا فإِنَّهُ إِثْمٌ قَلْبُهُ. وَاللَّهُ
 بِمَا تَعْمَلُونَ عَلِيمٌ ﴿٢٨٣﴾

284. Eebaa iska leh waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, haddad muujisaan waxa naftiina ku sugan ama qarisaan wuu idin ka xisaabin Eebe, wuuna u dhaafi cidduu doono ama Cadaabi Ciddu doono, Eebena wax kasta wuu karaa.

لِلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَإِنْ تُبَدُّوْا
 فِي أَنْفُسِكُمْ أَوْتَحْفَوتُمْ يُحَاسِبْكُمْ بِهِ اللَّهُ
 فَيَغْفِرُ لِمَنْ يَشَاءُ وَيُعَذِّبُ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ
 شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٨٤﴾

Haddii safar la yahay oon la helayn qore waxaa la kala qaadan Rahan "Cudhaadh " hadii lays aaminana ha siiyo kii la aaminay cidii aamintay Xaqeeda'Eebana haka yaabo, Maragana yaana la qariniin'illeen Ciddii qarisa wuu dambaabiye'Eebana waa ogyahay waxaad camalfalaysaan. Samooyinka iyo Dhulka waxa ku suganna Eebaa iska leh, wax kastoof fashaanna ama muuji ama qari ee mar walba Eebe wuu ku xisaabin Dadka'Cidduu doonana wuu u dhaafi tuu doonana wuu cadaabi'illeen wax kasta wuu karaayee, Rassulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi : Eebe Wuxuu yidhi hadduu doono addoonkaygu xumaan haddu ha uqorina intuu ka falo, hadduu falana mid u qora, hadduu wanaag doono ka dibna falin u qora Wanaag, hadduu falana u qora Toban Wanaag (Waa saxiix).

markay aayadan soo dagtayna Asaxaabtii Nabiga aad bay u cabsadeen hasayee shee Eebaa sheegay inaan Cidna lagu mashaqayn waxayan karin'taasina waxay ku tusin Cadaaladda iyo naxariista Eebe'kaliya

waxaa uun loo baahanyahay toosnaan iyo samo fal iyo Eebe ku xidhnaan. Al-Baqarah (283-284).

285. wuu rumeeyey Rasuulku wixii looga soo dajiyey Xaga Eebihis, Mu' miniintuna (way rumeeyeen) dhamaana waxay rumeeyeen Eebe, Malaa'igtiisa kutubtiisa iyo Rasuuladiisa, mana kala geynayno mid ka mid ah Rasuuladiisa dhexdooda, waxayna dhaheen waan maqalnay oon adeecnay, dhaafiddaada yaan ku waydiisanaynaa Eebahanow, xaggaagaana loo ahaan.

ءَامِنَ الرَّسُولُ بِمَا أُنزِلَ إِلَيْهِ مِنْ رَبِّهِ ۚ وَالْمُؤْمِنُونَ
كُلٌّ ءَامِنٌ بِاللَّهِ وَمَلَأَتْ مِنْهُ ۖ وَكُنِيَ لَهُ
وَرَسُولُهُ ۚ لَا تَقْرَفُ بَيْنَ أَهْلِ دِينٍ رَسُولُهُ ۚ وَقَالُوا
سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا ۚ غُرَّتْ عُرُوقُنَا ۖ ذُنُوبُنَا أَلَمَطٌ ۖ

286. kuma mashaqeyo Eebe naf waxay awoodo mooyee, waxay mudan waxay kasbatay (oo wanaag ah) waxaana korkeeda ah waxay isu kasbatay (oo xumaana) Eebow ha noo qabanin hadaan halmaanno ama gafno, Eebow ha nagu xambaarin Culays saad ugu xambaartay kuwii naga horeeyey, Eebow hanagu xambaarin (dhibin) waxaanaan awood u lahayn, na cafina oo noodhaaf noona naxariiso, adaa gargaarahanaga ahe, nooga gargaar qaarka gaalada ah.

لَا يَكْفُرُ اللَّهُ فَنَسَا إِلَىٰ أَسْمَٰهَا مَا كَسَبَتْ وَعَلَيْهَا
مَا اكْتَسَبَتْ رَبَّنَا لَا تُؤَاخِذْنَا إِن نَّسِينَا أَوْ
أَخْطَأْنَا رَبَّنَا وَلَا تَحْمِلْ عَلَيْنَا إَصْرًا كَمَا
حَمَلْتَهُ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِنَا رَبَّنَا وَلَا تُحَمِّلْنَا
مَا لَا طَاقَةَ لَنَا بِهِ ۖ وَاعْفُ عَنَّا وَارْحَمْنَا ۚ أَنْتَ
مَوْلَانَا فَانصُرْنَا عَلَى الْقَوْمِ
الْكَافِرِينَ ۝

Waxay ku tusin aayadda hore in xaqa aad u yeedhi aad dhab u rumeysid Sida Eebe u sheegay in Rasuulku iyo Mu' miniintuba rumeeyeen Quraanka iyo xaqa Eebe soo dajiyey, tan kale waajibnimada rumeynta Eebe, Malaa'igtiisa Kutubtiisa iyo Rasuuladiisa, oon la kala qaybinin, Xaqana la maqloo la adeeco, waxayna caddaysay arkaanta Iimaanka badideed, aayadda kale waxay cadayn inaan Eebe ku dhibin addoonkiisa wuxuusan awoodin wax kastaba ha ahaadee'nafwalbana ay mudan waxay kasbato'halmaansho iyo gafna Eebe uga naxariistay Dadka, Culayskii umadihii hore saarnaana laga fududeeyey, waxayna ku dhammaatay Suuradu Warsi Cafi Alle, Dambidhaaf, naxariis iyo ka guulaysi Gaalada.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi : ruuxii akhriya laba aayadood ee Suuradda Baqara u dambeeya Habeen way ku fillaan. Waxaa wariyey Bukhaari.

Waxaa kaloo Nabigu yidhi : Waxaa laygu soo diray Diin toosan oo Fudud. Al-Baqarah (285-286).

Suurat Aali-Cimraan

سُورَةُ آلِ عِمْرَانَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariisguud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Waxay ku tusin Mucjisada Quraanka).

الْعَر ١

2. Allaah, ku xaq lugu caabudo ma jiro oon isaga ahayn, ee Nool, ee Maamula khalqiga.

اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْحَيُّ الْقَيُّومُ ٢

3. Wuxuu kugu Dejiyey (Nabiyow) Kitaabka (Quraanka) si Xaq ah, isagoo u Rumeyn wixii ka Horeeyey, wuxuuna soo Dejiyey Eebe Tawreed iyo Injiil (waqti).

نَزَّلَ عَلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ وَأَنزَلَ التَّوْرَةَ وَالْإِنْجِيلَ ٣

4. Hore iyagoo Hanuun u ah Dadka, wuxuuna soo Dejiyey (Eebe) Furqaan (Quraanka) kuwa ka Gaaloobay Aayaadka Eebe waxay Mudan Cadaab Daran, Eebana waa Adkaade Aarsada.

مِن قَبْلُ هُدًى لِّلنَّاسِ وَأَنزَلَ الْفُرْقَانَ إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا بِعَايَاتِ اللَّهِ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ وَاللَّهُ عَزِيزٌ ذُو انتِقَامٍ ٤

5. Eebana kagama Qarsoona Korkiisa waxa dhulka iyo Samada midna.

إِنَّ اللَّهَ لَا يَخْفَى عَلَيْهِ شَيْءٌ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي السَّمَاءِ ٥

6. Waana Eebaha idinku Sawira (Abuura) Riximiyada (Ilmo galeenka) siduu Doono, ku xaq lugu caabudo majiro Allah mooyee waana Adkaade Falsan.

هُوَ الَّذِي يُصَوِّرُكُمْ فِي الْأَرْحَامِ كَيْفَ يَشَاءُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ٦

Waxay soo degeen Aayadahan mar Wafdi ka yimid Xagga Najraan Sanadkii Sagaalaaad ee Hijrada, waxayna sugi Kalinimada Eebe, Noloshiisa, Awoodiisa, Xaqnimada Quraanka, inuu u rumeyn Kutubtii hore wixii Xaq ah, iyo inuu Hanuun u yahay Dadka, Xaqa iyo Baadilkana uu kala bixin, Ciddii Xaqa diidana uu Cigaabi Eebe wax kaga qarsoonnaa uusan jirin cir iyo dhul midna. Siduu doonana uu Dadka ugu Abuuro uurka hooyo, Nawaas Binu Samcaan waxaa laga wariyey inuu yidhi: Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo iyo Nabdgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaa la keeni Quraanka Maalinta Qiyaame iyo Ehelkiisii ku Camal fail jiray, Isagooy hor socoto Suuratu Baqara iyo Aal Cimraan. Aali-Cimraan (1-6).

7. Eebe waa kan kugu soo dejiyey Kitaabka, waxaana ka mid ah Aayado sugan (Macnahoodu Cadyahay) oo ah Hooyada Quraanka (Asalkiisa) iyo ku-

هُوَ الَّذِي أَنزَلَ عَلَيْكَ الْكِتَابَ مِنْهُ آيَاتٌ مُحْكَمَاتٌ هُنَّ أُمُّ الْكِتَابِ وَأُخَرُ مُتَشَابِهَاتٌ فَأَمَّا الَّذِينَ فِي

wa kale oo isu eg, kuwa Qalbigoodu leexasho ku jirto waxay, Raacraacaan kan is shabaha (isu eg) doonid Fidmo (Xumaan) iyo doonid Ta'wiil (Leexin Fasir) darted, wax og Fasirka (kaasna) Ma jiro Eebe iyo kuwa ku Xididaystay Cilmiga mooyee, waxayna dhihi waan rumeynay kaas, dhammaana wuxuu ka ahaaday Eebeheen agtiisa, mana waantoobo kuwa caqliga leh mooyee.

8. Eebow ha iilin Quluubtannada intaad hanuunisay ka dib, nagana sii agtaada Naxariis, adiga unbaa bixinbadane ehe.

9. Eebow adaa u kulmin Dadka Maalin darted (Qiyaamada) oon shaki lahayn, Eebana ma baajiyo Ballanka.

فَلْيُهِمْ زَيْعُ فَيَتِيمُونَ مَا تَشَبَهَ مِنْهُ اتِّعَاةُ الْفِتْنَةِ
وَاتِّعَاةُ تَأْوِيلِهِ وَمَا يَعْلَمُ تَأْوِيلَهُ إِلَّا اللَّهُ وَالرَّاسِخُونَ
فِي الْعِلْمِ يَقُولُونَ آمَنَّا بِهِ كُلٌّ مِنْ عِنْدِ رَبِّنَا وَمَا يَذَّكَّرُ
إِلَّا أُولُو الْأَلْبَابِ ﴿٧﴾

رَبَّنَا لَا تُرِغْ قُلُوبَنَا بَعْدَ إِذْ هَدَيْتَنَا وَهَبْ لَنَا مِنْ لَدُنْكَ
رَحْمَةً إِنَّكَ أَنْتَ الْوَهَّابُ ﴿٨﴾
رَبَّنَا إِنَّكَ جَامِعُ النَّاسِ لِيَوْمٍ لَا رَيْبَ فِيهِ إِنَّ اللَّهَ لَا يُخْلِفُ
الْعَهْدَ ﴿٩﴾

Eebaa Quraanka soo dejiyey, isagoo midna macnihiisu Cadyahay, midna is shaboho "caddayn" oo u baahan garashadiisu Cilmi dheeraad ah, mana haboona in Quraanka loo leexiyo si aan habooneyn Xaqna ahayn, si loo Fidmeeyo loona dhumiyi Dadka, waase in dhamaan la rumeeyo Quraanka, Eebana la weydiisto ku sugnaanta Xaqa iyo inuusan leexinin Quluubta, illeen isagaa wax bixiye, Dadkana kulmiya Qiyaamada, yaboohana baajineyn. Rassulka (Naxariis iyo Nabadgalayo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Haddaad aragtaan kuwo ku murmi Quraanka waa kuwa Eebe Magacaabayee ka digtoonaada (Imaan Axmed) wax badan wuxuu ku ducaysan jiray Nabigu: Eebaha gadiya Quluubtow ku sug Qalbigeyga Diintaada...

Waxaa wariyey Ibnu Marda weyhi. Aali-Cimraan (7-9).

10. kuwa Gaaloobay ugama taraan Xoolahoodu iyo Caruurtoodu Eebe xagiisa waxba, kuwaasina iyaga umbaa ah Shidaalka Naarta.

11. Waa sidii caadadii Fircoon iyo Ehelkiisii iyo kuwii ka horreeyey, waxay beeniyeen Aayaadkanagii, markaasuu Qabtay Eebe Dambigooda dartiis, Eebana waa darantahay Cigaabtiisu.

12. Waxaad u dhahdaa kuwii Gaaloobay waa laydinka adkaan, waxaana laydiin soo kulmin Jahannamo iyadaana u xun Gogol.

13. Waxaa idiinku sугan Aayad Labo Kooxood oo kumay (Dagaalamay) Kooxu Waxay ku Dagaalami Jidka Eebe tan kalana waa Gaal, waxayna

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَلَنْ تَعْمُرَ عَنْهُمْ أَمْوَالُهُمْ وَلَا
أَوْلَادُهُمْ مِنَ اللَّهِ شَيْئًا وَأُولَئِكَ هُمْ وَقُودُ النَّارِ ﴿١٠﴾

كَذَّابٌ ءَالٍ فِرْعَوْنَ وَالَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ
كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا فَأَخَذَهُمُ اللَّهُ بِذُنُوبِهِمْ وَاللَّهُ
سَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿١١﴾

قُلْ لِلَّذِينَ كَفَرُوا سَعْتَابُونَ وَنَحْشُرُونَ
إِلَىٰ جَهَنَّمَ وَيَبْسُ إِلَهُمَ ۗ ﴿١٢﴾

فَكَانَ لَكُمْ آيَةٌ فِي فَعْتَنِ ۚ لَنْتَقَاتُ فِعْتَهُ
نَقْتِلُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَالْآخِرَىٰ كَأَفْوَءٍ يَرَوْنَهَا

ku arkaan Mu'miniinta laba Jibaarkood Xagga argtida Isha, Eebana waa ku ayidaa (Xoojiyaa) Gargaarkiisa Cidduu doono arrintaasna waanaa ugu sugan Ciddii Arag leh (wax garan).

مَنْ يَشَأْ رَأَىٰ أَمْنَيْنِ ۗ وَاللَّهُ يُؤَيِّدُ بَصِيرَتَهُ
مَنْ يَشَأْ ۗ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَعِبْرَةً لِّأُولِي
الْأَبْصَارِ ﴿١٣﴾

Xoolo iyo Caruur iyo wax kale toona wax ugama taraan Eebe agtiisa Cidii ku Madax adayga Gaaladana waxay lamid tahay tii Fircoon iyo Qoomkiisii iyo kuwii ka horeeyey ee Eebe si daran u qabtay, Cidii Xoog isbidda iyadoo gaal ah waxaa uun u dambeyn Jab iyo Halaag iyo Galidda Jahannamo, Ciddii waana qaadanna ha fiiriso Dagaalkii Badar iyo in Eebe u gargaaray Mu'miniintii Xaqa ku dagaalamaysay.

Rassulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee) Yaa istaagay Habeen Maka wuxuuna yidhi: "Eebow ma gaadhsiiyey" Sedex jeer Markaasuu Cumar Yidhi: Haa waadna dadaashayood isdhibtay ood nasexaysay, ee Samir, Markaasuu yidhi: Nabigu Waxaa sarrayn Iimaanka ilaa Gaalnimadu ku noqoto Waddankeedii, waxayna la dhunban Rag Badda Islaamka. Aali-Cimraan (10-13).

14. Waxaa loo qurxiyey Dadka Jacaylka waxa Naftu doonto oo ah Haween, Wiilal iyo wax badan oo laban laaban oo Dahab iyo qalin ah, iyo Fardo laylyan oo darban, iyo Ancaamta (Xoolahanool) iyo Beeraha, arrintaasna waa raaxada Noloshu Aduun, Eebe agtiisaana noqosho wanaagsan leh.

رُئِيَ لِلنَّاسِ حُبُّ الشَّهْرَاتِ مِنَ النِّسَاءِ وَالْبَنِينَ
وَالْقَنَاطِيرِ الْمُقَنْطَرَةِ مِنَ الذَّهَبِ وَالْفِضَّةِ
وَالْحِجْلِ الْمَسُومَةِ وَالْأَنْعَمِ وَالْحَرِثِ ۗ ذَٰلِكَ مَتَّعَ
الْحَيَوٰةَ الدُّنْيَا ۗ وَاللَّهُ عِنْدَهُ حُسْنُ الْمَبَآئِ ﴿١٤﴾

15. Maydiin ka warramaa wax ka khayroon kiinaas, kuwa dhawrsada waxaa ugu sugnaaday Eebahood agtiisa Jannooyin ay dareeri dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda iyo Haween la Daahiriyeey iyo raalli ahaansho Eebe, Eebana waa arkaa Addoomada.

* قُلْ أُو۟سِّدْتُكُمْ يَحْيٰىرَ مِّنْ ذَٰلِكُمْ ۗ لِلَّذِينَ اتَّقَوْا
عِندَ رَبِّهِمْ جَنَّاتٌ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ
خَالِدِينَ فِيهَا وَأَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ وَرِضْوَانٌ مِّن
اللَّهِ ۗ وَاللَّهُ بِالصَّٰبِرِينَ بِالْعَبَادِ ﴿١٥﴾

16. ee ah kuwa dhihi Eebow anagu waan rumeynay ee noo dhaaf Dambiyadanada nagana dhawr Cadaabka naarta.

الَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا إِنَّا أَمْنَا فَاغْفِرْ لَنَا
دُ۞نُو۟نَنَا وَفِنَا عَذَابَ النَّارِ ﴿١٦﴾

17. Ee ah kuwa Samra ee Runloowga ah, ee Adeeca Eebe, ee wax bixiya, ee dambi dhaaf warsada Aroortii.

الصَّٰدِقِينَ وَالصَّٰدِقَاتِ وَالْمُتَّقِينَ وَالْمُتَّقَاتِ
وَالْمُسْتَعْفِرِينَ بِالسَّحَابِ ﴿١٧﴾

Dabeecadda Dadka waxaa ka mid ah inuu Jeclaado Noloshu Adduunka iyo waxa laysku qurxiyo oo Xoolo, Ehel iyo Lacagba ah, Eebe agtiisaase Wanaag, Janooyin, Ehel Nadiif ah iyo Rilaha Eebe jiraan, waxaana mudan arrimahaas kuwa Eebe Dambi dhaafka warsada ee ka magangala Naarta, ee ku sifooba Samir, Runsheeg, Daacad, Wax bixin iyo toobad keen. Ibraahim Binu Xaadhib wuxuu ka wariyey Aabihiis inuu yidhi: Waxaan maqlay Ruux Aroortii ku leh dhinaca Masjidka: Eebow waad i

amartay waana ku adeecay, Waqtiguna waa Aroor ee ii dhaaf (Dambiga) Markaasaan dayay illeen waa Ibnu Mascuud Eebe ha ka raali noqdee. Aali-Cimraan (14-17).

18. Eebe wuxuu Qirayaa inaan Ku xaq lugu caabudaa jirin isaga mooyee, Malaa'igtuna (way qiri) iyo kuwa Cilmiga leh, Maamulana Cadaalad, ku xaq lugu caabudaa ma jiro isaga mooyee waana adkaade Falsan.

شَهِدَ اللَّهُ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ وَالْمَلَائِكَةُ
وَأُولُو الْعِلْمِ قَائِمًا بِالْقِسْطِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ
الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١٨﴾

19. Diintuna (Xaqa ah) Eebe agtiisa waa Islaamka, ismana khilaafin kuwii la siiyey Kitaabka intuu u yimid Cilmi mooyee, Xasad (Dulmi) dhexdooda ah dartiis, ruuxii ka Gaalooaba Aayaadka Eebe, Ilaahay waa deg deg badantahay Xisaabitisu (wuu Ciqaabi).

إِنَّ الَّذِينَ عِنْدَ اللَّهِ لَلْإِسْلَامُ وَمَا اخْتَلَفَ الَّذِينَ
أَوْفُوا الصَّكَّةَ لِلْإِمْنِ بَعْدَ مَا جَاءَهُمُ الْعِلْمُ
بَعِيًا بَيْنَهُمْ وَمَنْ يَكْفُرْ بِآيَاتِ اللَّهِ فَإِنَّ اللَّهَ
سَرِيعُ الْحِسَابِ ﴿١٩﴾

20. Hadday kula Xujaytamaan (Murmaan) waxaad dhahdaa waxaan u Hogaamiyey Wajigayga Eebe (Ani) iyo inta i raacday, waxaad ku dhahdaa kuwa la siiyey Kitaabka (Ehelu Kitaabka) iyo Umiyiinta (Wax aqoon) ma Hogaansamaysaan (Hogaansama) hadday hogaansamaanna way Hanuuneen, Hadday Jeedsadaanna waxaa uun ku saran - Gaadhsiin, eebana waa arkaa addoomada.

فَإِنْ حَاجُّوكَ فَقُلْ أَسَمِعْتُ وَجْهِيَ لِلَّهِ وَمَنِ
أَتَيْتُمْ وَقُلْ لِلَّذِينَ أُوتُوا الصَّكَّةَ وَالْأُمِّيِّينَ
ءَأَسَمِعْتُمْ فَإِنْ آسَأْتُمْ فَقَدْ أَهْتَدُوا وَإِنْ تَوَلَّوْا
فَإِنَّمَا عَلَيْكَ الْبَلْغُ وَاللَّهُ بَصِيرٌ بِالْعِبَادِ ﴿٢٠﴾

Kalinimada Eebe iyo Xaqnimadiisa waxaa qiray Eebe, Malaa'igta, kuwa Cilmiga leh, Diinta Dhabta ah ee Xaqa ahna waa Diinta Islaamka, waxa ka soo hadhay waa wax kama jiraan, Gaaladuna waxay Xaqa u diideen Kibir iyo Xasad, Eebaana ku ciqaabi, Muran iyo doodna looma baahna ee waa in Eebe loo hogaansamo, Dadkoo dhanna waa inay Islaamaan 'Cidii diidana xil kama saarra Nabiga, wuxuuna yidhi Nabigu: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeele) Nabiyada waxaa loo bixiyey Qoomkooda anigase waxaa la iibixiyey Dadka Dhamaantiis. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Waxayna ku tusin Aayadu in Eebe Rassulka u diray Dadkoo Dhan, oo ciddaan rumeynin Dhuntay tahayna Ehelka Naarta. Aali-Cimraan (18-20).

21. Kuwa ka Gaaloobi Aayaadka Eebe oo u Dila Nabiyada Xaq darro oo Dila kuwa fara Caddaaladda oo Dadka ka mid ah ugu Bishaaree Cadaab Daran.

إِنَّ الَّذِينَ يَكْفُرُونَ بِآيَاتِ اللَّهِ وَيَقْتُلُونَ
الْنَّبِيِّينَ بِغَيْرِ حَقٍّ وَيَقْتُلُونَ الَّذِينَ
يَأْمُرُونَ بِالْقِسْطِ مِنَ النَّاسِ فَبَشِّرْهُمْ
بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٢١﴾

22. Kuwaasi waa kuwuu buray (Hoobtay) Camalkoodu Adduun iyo Aakhiraba mana u sugnaan wax u gargaara.

أُولَئِكَ الَّذِينَ حَبِطَتْ أَعْمَالُهُمْ فِي الدُّنْيَا
وَالْآخِرَةِ وَمَا لَهُمْ مِنْ نَاصِرِينَ ﴿٢٢﴾

23. Ma aragtay (ka waran) kuwii la siiyey Qayb ka mid ah Kitaabka oo loogu yeedhi Kitaabka Eebe inuu kala xukumo dhexdooda markaas ay jeedsan Koox ka mid ah iyagoo diidan (Xaqa).

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ أَوْتُوا نَصِيبًا مِنَ الْكِتَابِ يُدْعَوْنَ إِلَى
كِتَابِ اللَّهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ فَيَتَوَلَّى فَرِيقٌ مِنْهُمْ وَهُمْ
مُعْرِضُونَ ﴿٢٣﴾

24. Waxaana ugu wacan inay dheheen ma na taabato Naaru Maalmo mooyee, waxaa ku dhagray Diintooda waxay been abuuran jireen.

ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَالُوا لَنْ نَسْتَأْذِنَكَ إِنَّا
أَيُّمَا مَا مَعُدَدَاتٍ وَعَرَّهْمُ فِي دِينِهِمْ مَا
كَأُوْلَئِكَ قَوْمٌ ﴿٢٤﴾

25. Ee say ahaan markaanu u kulmino Maalin aa shaki lahayn, loona oofiyo (dhameeyo) Naf kastaa waxay kasbatay iyagoon la dulmayn.

فَكَيْفَ إِذَا جُمِعْتَهُمْ لِيَوْمٍ لَا رَيْبَ فِيهِ وَوُفِّقَتْ
كُلُّ نَفْسٍ مَّا كَسَبَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٢٥﴾

Kuwii Gaaloobay ee diiday Aayaadka Eebe oo layn jiray Nabiyada iyo kuwa Xaqa Fara Dadka, si Xaq darro ahna u wax yeelleeyey, waxay mudan Caddab daran, Camalkooduna wuu buri Aduun iyo aakhiraba, wax u gargaarana ma helaan, Abuu Cubayda Binul Jarraax waxaa laga wariyey inuu yidhi: Waxaan idhi: rasuulka Eebow yaa Dadka ugu Cadaab daran Maalinta Qiyaamo wuxuuna yidhi Nabigu: Ruux Dilay Nabi ama dilay ruux fari wanaag reebina Xumaanta...

Waxaa wariyey Ibnu Abii Xaatim iyo Ibnu Jariir.

Yuhuud iyo Nasaara waxaa la kala siiyey Tawreed iyo Injiil, waxaana loogu yeedhay inay rumeeyaan Kitaabka Quraanka ah ee Xaqa ah, iskuna Xukumaan, weyse diideen iyagoo qaarkood sheegay inaan la cadaabayn wax Maalmo ah oo tirsan mooyee, taasina waxaa ugu wacan Dhagar iyo Been abuurashada ay ku samayn Diinta, waxaase la abaal marin Qiyaamada oon Cidna la dulmiyeyn. Aali-Cimraan (21-25).

26. Waxaad dhahdaa Eebow adaa hanta Xukunka waxaad siisaa Xukunka Ciddaad doonto waxaad ka siibttaa "Wareejisaa" Xukunka Ciddaad doonto waxaadna cisaysaa Ciddaad doonto waxaadna Dulaysaa Ciddaad doonto adaana Hanta Khayrka, adaana wax kasta kara.

قُلْ اللَّهُمَّ مَلِكُ الْمَلِكِ تُوْتِي الْمَلِكَ مِنْ نَشَاءٍ وَتَنْزِجُ
الْمَلِكَ وَمَنْ نَشَاءُ وَتُعِزُّ مَنْ نَشَاءُ وَتُذِلُّ مَنْ نَشَاءُ
يَبْدَأُ الْخَيْرُ إِنَّكَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٦﴾

27. Waxaadna dhexgalisaa Habeenka Maalinta, dhexgelisaa Maalinta Habeenka, kana soo bixisaa wax Nool wax dhimaad ah kana soo bixisaa wax dhimaad ah wax Nool, waadna Arzaaqdaa Ciddaad doonto Xisaab la'aan.

تُوْلِيحُ النَّيْلِ فِي النَّهَارِ وَتُوْلِيحُ النَّهَارِ فِي النَّيْلِ
وَتُنْجِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَتُنْجِجُ الْمَيِّتَ مِنَ الْحَيِّ
وَتَرْزُقُ مَنْ نَشَاءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿٢٧﴾

28. Yeyna ka yeelan Mu'miniintu Gaalada Sokeeye Mu'miniinta ka Sokow ruuxii fala saas Alle beri buu ka yahay, inaad dhawrsasho xaggooda kadhawrsataan mooyee, wuxuuna idiinka digi Eebe Naftiisa, xaga Eebaana loo ahaan.

لَا يَتَّخِذِ الْمُؤْمِنُونَ الْكَافِرِينَ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِ
الْمُؤْمِنِينَ وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ فَلَيْسَ مِنَ اللَّهِ فِي شَيْءٍ
إِلَّا أَنْ تَتَّقُوا مِنْهُمْ تُقَاتَةٌ وَيُحَدِّثُ اللَّهُ نَفْسَهُ
وَاللَّهُ الْعَصِيمُ ﴿٢٨﴾

Eebaa awoodda iska leh, Cidduu doonana wuxuu u dhiibaa Xukunka, tuu doonana wuu ka wareejiyaa, waxna isagaa sharrifa waxna duleeya, wax kastana awoodiisay ku hoos jiraan, Nusqaaminta Habeenka iyo Maalinta, ka soo saaridda wax Nool wax dhimaad ah, iyo wax dhimaad ah wax Nool, wax Arzuqiddana isagaa hanta, tan kale ma habboona mana bannaana in Mu'miniintu Gaalada ka sokeeye yeeshaan iyagoo ka leexan Mu'miniinta Cidii saas fashana Eebe kidhiidh kama dhexeeyo, marka laga reebo duruuf iyo waqti gaar ah oo Mu'miniintu Gaalada sharkooda ka dhawrsan, waana in Eebe laga digtoonaado illeen xaggiisaa loo ahaane. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Dhawrsashadu ma aha Camal ee waa uun Carrab, (ka dhawrsashada Gaalada). Aali-Cimraan (26-28).

29. Waxaad dhahdaa haddaad Qarisaan waxa Laabtiinna ku sugan ama aad muujisaan waa ogaan Eebe, wuxuuna ogaan waxa Samooyinka ku sugan iyo Dhulka, Eebana wax kasta wuu karaa.

قُلْ إِنْ تَحْفَظُوا مَا فِي صُدُورِكُمْ أَوْ يُبْدُوهُ يَعْلَمَهُ
اللَّهُ وَيَعْلَمُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَاللَّهُ
عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٩﴾

30. (Xusuuso) Maalinta ay heli Nafkasta waxay Camal fashay oo Khayr ah oo la soo xaadiriyeey (la keenay) waxay Camal Fashay oo Xumaan ahna waxay jeclaan in la yeelo iyada iyo isaga dhexdooda muddo dheer, wuxuuna idiinka digi Eebe Naftiisa (Ciqaabtiisa) Eebana waa u Naxariistaha Addooma-diisa.

يَوْمَ يَجِدُ كُلُّ نَفْسٍ مِمَّا عَمِلَتْ مِنْ خَيْرٍ مُحْتَضِرًا
وَمِمَّا عَمِلَتْ مِنْ سُوءٍ تَوَدُّ لَوْ أَنَّ بَيْنَهَا وَبَيْنَهُ أَمَدًا
بَعِيدًا وَيَحَدِّثُ اللَّهُ نَفْسَهُ وَاللَّهُ رَءُوفٌ
بِالْعَبَادِ ﴿٣٠﴾

31. Waxaad dhahdaa haddaad tihiiin kuwo jecel Eebe i raaca haydin jeclaaado Eebe hana idiin dhaafo dambigiinee, Eebana waa dambi dhaafe Naxariista.

قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ
وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٣١﴾

32. Waxaad dhahdaa adeeca Eebe iyo Rasuulkiisa, haddaad jeedsataan Eebe ma jecla Gaalada.

قُلْ أَطِيعُوا اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَإِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ
الْكَافِرِينَ ﴿٣٢﴾

Waxba kama qarsoona Eebe, ama laab ha lagu qariyo ama ha la muujiyo. ama Cir iyo dhul ha ku sugnaadee, waana awoodde ka abaal marin naf kasta waxay Camal fashay Khayr iyo Sharba, waana Naxariis badane ka digi Ciqaabtiisa, faray in ciddii jecel Eebe ay raacdo Nabiga si Eebe u jeclaaado uguna dambi dhaafo uguna Naxariisto, waana waajib in Eebe iyo Rasuulkiisa la addeeco, ciddii ka jeedsataan

waa Gaaloowday Eebana ma jecla Gaalo. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Cidda fasha waxaan Amarkannaga ahayn waa lagu Celin (Diidi). Xasanul Basri Wuxuu Yidhi: Eebe Naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu isaga Digo Dadka. Aali-Cimraan (29-32).

33. Eebe wuxuu ka doortay Aadan, Nuux, Ehelkii Ibraahim iyo Ehelkii Cimraan Caalamka.

﴿إِنَّ اللَّهَ اصْطَفَىٰ آدَمَ وَنُوحًا وَآلَ إِبْرَاهِيمَ وَآلَ عِمْرَانَ عَلَى الْعَالَمِينَ﴾ ٣٣

34. Waana Farac Qaarkood Qaar ka yimid, Eebana waa Maqle oge ah.

﴿ذُرِّيَّةً بَعْضُهَا مِنْ بَعْضٍ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ﴾ ٣٤

35. Xusuuso markay tidhi Haweenaydii Cimraan Eebow waxaan kuugu Nadray waxa uurkayga ku jira inuu Xorkuu ahaado (Cibaadada) ee iga aqbal adiga umbaa wax Maqle oge ehe.

﴿إِذْ قَالَتْ أُمَّرَأْتُ عِمْرَانَ رَبِّ إِنِّي نَذَرْتُ لَكَ مَا فِي بَطْنِي مُحَرَّرًا فَتَقَبَّلْ مِنِّي إِنَّكَ أَنْتَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ﴾ ٣٥

36. Markay dhashay Gabadh waxay tidhi Eebow waxaan dhalay Dhaddig, Eebana waa ogyahay waxay dhashay Labna la mid ma aha Dhaddig, waxaana ku magacaabay Maryam waxaana kaa magan galin iyada iyo Faraceeda Shaydaanka la dhagaxyeeyey (la dheereeyey).

﴿فَلَمَّا وَضَعَتْهَا قَالَتْ رَبِّ إِنِّي وَضَعْتُهَا أُنْثَىٰ وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا وَضَعَتْ وَلَيْسَ الذَّكَرُ كَالْأُنْثَىٰ وَإِنِّي سَمَّيْتُهَا مَرْيَمَ وَإِنِّي أُعِيذُهَا بِكَ وَذُرِّيَّتَهَا مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ﴾ ٣٦

Eebe Sareeye wuxuu Abuuray Doortay Aadam Nafna galiyey, Malaa'igtana faray inay u sujuudo, barayna Magaca wax kasta, Dajiyeyna Janada, kana soo dejiyey Xigmad darted, inuux ka dhigay Rasuulkii ugu horreeyey Doortayna isaga iyo Ehelkii Nabi Ibraahim iyo Ehelkii Cimraan. Aayadaha kale waxay sheegi Maryam Hooyadeed iyo siday ugu Nadartay in waxa Uurkeeda ku jira hadduu Lab noqdo ka shaqeyo Kaniisadda, markuu noqday Gabadhna ay ka magangalisay Eebe Shaydaanka iyada iyo waxay dhasho, Rasuulkuna wuxuu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Cid kastoo la dhalo Shaydaanbaa taabta Ciise Ibnu Maryam mooyee, markaasuu Akhriyey Nabigu Aayadda (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Aali-Cimraan (33-36).

37. Wuxuuna ka aqbalay Eebe aqbal fiican, wuuna koriyey korin fiican (Xanaano) waxaana kafaala qaaday (Dhaqaaleeyey) Zakariye, markastoo ugu galana Mixraabka (Qolka) wuxuu ka helaa agteeda Rizqi, wuxuuna dhahaa xaggee kaaga yimid Maryamey kan, waxayna dhahdaa wuxuu ka yimid Eebe agtiisa, Eebana wuu u Arzuqaa Cidduu doono Xisaab la'aan.

﴿فَتَقَبَّلَهَا رَبُّهَا بِقُبُولِ حَسَنٍ وَانْبَتَهَا نَبَاتًا حَسَنًا وَكَفَّلَهَا زَكَرِيَّا كُلَّمَا دَخَلَ عَلَيْهَا رَبُّكَ الْعِمْرَانَ وَجَدَ عِنْدَهَا رِزْقًا قَالَ يَمْزِجُ لَكَ لِهَذَا قَالَتْ هُوَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ يَرْزُقُ مَنْ يَشَاءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ﴾ ٣٧

38. Halkaasuu baryey Zakariye Eebi-

﴿هَذَا لَكَ دَعَاؤُكَ يَا رَبِّ فَقَالَ رَبِّ هَبْ لِي مِنْ لَدُنْكَ

hiis, yidhina Eebow iga sii agtaada Farac wanaagsan adaa maqla (ajiiba) Ducadee.

39. waxaana u dhawaaqday Malaa'igtii isagoo taagan oo ku Tukan Mixaraabka Eebe wuxuu kuugu Bishaarayn Yaxye isagoo rumeyn Kalimada Eebe (Ciise) Sayidna ah Haween u tegiddood iska ilaaliyey, Nabina ah, ka mid ah kuwa waanagsan.

40. Wuxuu yidhi Eebow sidee iigu ahaan Wiil Anooy isoo gaadhay Duqnimo, Haweeneydeyduna Madhalaystahay, wuxuu yidhi saasuu u falaa Eebe wuxuu doono.

41. Wuxuu yidhi Eebow ii yeel Calaamo wuxuuna yidhi Calaamaddu waa inaad la hadlin Dadka Saddex Maalmood ishaaro Mooyee, Xusna Eebahaa wax badan, una Tasbiixso Galabtii iyo A roortiiba.

Waxay caddayn Aayaduhu sida Eebe Maryam u dhaqaaleeyey una Arzaaqay, Nabi Zakariyana u xanaaneeyey, markuu wax layaab leh ku arkeyna baryay Eebe inuu Ilmo siiyo looguna Bishaareeyey Yaxye, inkastoo uu wayn yahay Haweeneyduna ayan dhalin, hasa yeesh eebe wuxuu doono wuu karaa, waxaana la faray inusan Saddex maalmood Dadka la hadlin ee Cibaadaysto, taasoo Calaamo u ah Aqbal iyo siinta Wiilka. Aali-Cimraan (37-41).

42. (Xusuuso) markay tidhi Malaa'igtu maryamoy Eebe waa ku doortay waana ku daahir yeelay wuxuuna kaa doortay Haweenka Caalamaka.

43. Maryamooy adeec (u khushuuc) Eebahaa sujuudna Rukuucna (la tuko) kuwa rukuuca (Tukada).

44. Taasi waa warka waxa Maqan oonnu kuu waxyoona mana aadan la joogin markey tuurayeen Qalimadooda koodii kafaala qaadi Maryam, mana aadan la joogin markey murmayeen.

45. (Xusuuso) markey tidhi Malaa'igtu

ذُرِّيَّةَ طَيْبَةٍ إِنَّكَ سَمِيعُ الدُّعَاءِ ﴿٣٨﴾

فَتَادُّهُ الْمَلَكُ وَهُوَ قَائِمٌ يُصَلِّي فِي الْمِحْرَابِ
أَنَّ اللَّهَ يُبَشِّرُكَ بَيْحَتِكِ مِصَدَقًا بِكَلِمَةٍ مِنَ اللَّهِ
وَسَيِّدًا وَحَصُورًا وَنَبِيًّا مِّنَ الصَّالِحِينَ ﴿٣٩﴾

قَالَ رَبِّ أَنَّى يَكُونُ لِي غُلَامٌ وَقَدْ بَلَغَنِيَ الْكِبَرُ
وَأَمْرًا قِيًّا قَالَ ذَلِكَ اللَّهُ يُفَعِّلُ
مَا يَشَاءُ ﴿٤٠﴾

قَالَ رَبِّ اجْعَلْ لِي آيَةً قَالَ آيَتُكَ أَلَّا تُكَلِّمَ
النَّاسَ ثَلَاثَةَ أَيَّامٍ إِلَّا ذِكْرًا وَأَذْكُرْ رَبَّكَ كَثِيرًا
وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ الْبَكْرَ وَالْآخِرَ ﴿٤١﴾

وَأَذْكَرَ لِي آيَةً قَالَ آيَتُكَ أَلَّا تُكَلِّمَ
النَّاسَ ثَلَاثَةَ أَيَّامٍ إِلَّا ذِكْرًا وَأَذْكُرْ رَبَّكَ كَثِيرًا
وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ الْبَكْرَ وَالْآخِرَ ﴿٤١﴾

يَسْمُرُ سَمْرًا أَقْنَى رِجْلَيْكَ وَأَسْجُدِي وَأَرْكَبِي
مَعَ الرَّاكِبِينَ ﴿٤٢﴾

ذَلِكَ مِنْ أَنْبَاءِ الْغَيْبِ نُوحِيهِ إِلَيْكَ وَمَا كُنْتَ لَدَيْهِمْ
إِذْ يَقُولُونَ أَفَلَمْ نَمُرُّبُهُمْ فِيكَفَلْ مَرَّوهم وَمَا كُنْتَ
لَدَيْهِمْ إِذْ يَخْتَصِمُونَ ﴿٤٣﴾

إِذْ قَالَتِ الْمَلَكُ لَكُنِّي بِمَرْيَمَ إِنَّ اللَّهَ يُبَشِّرُكَ بِكَلِمَةٍ

Maryamooy Eebe wuxuu kuugu Bishaarayn Kalimo Xaggiisa ah (Wiil) Magaciisu yahay Masiix Ciise Ibnu Maryam isagoo Sharaf leh Adduun iyo Aakhiraba kana mid ah kuwa la soo dhaweeyey.

مِنْهُ اسْمُهُ الْمَسِيحُ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ وَجِيهًا فِي
الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَمِنَ الْمَقَرَّبِينَ ﴿٤٥﴾

46. Kulana hadli Dadka Dharabta iyo isagoo (Gadhmodoobe) nin wayn ah kana mid ah kuwa Suuban.

وَيُكَذِّبُ النَّاسَ فِي الْمَهْدِ وَكَهْلًا
وَمِنَ الصَّالِحِينَ ﴿٤٦﴾

Aayaduhu waxay ka warrami waxay Mala'igtu kula hadashay Maryam iyadoo Fulin amarka Eebe, iyo sida Eebe u doortay una dhahiray, una faray inay cibaadada badiso, saasuuna Eebe ugaga warramay inkastoosan joogin Nabiga goobtaas, waxaa kalooy ka warrami sida Eebe ugu Bishaareeyey Nabi Ciise oo ah mid sharaf leh Aakhiro iyo Adduunba, Eebana dhaweeyey, isagoo Dadka kula hadlay Yaraan iyo Wayniba Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaa u khayr badan Haweenka Caalamka Afar: Maryama Bintu Cimraan, Aasiya Haweeneydii Fircoon, Khadija Bintu Khuweylid iyo Faadumo Binti Rasuulka Eebe. Waxaa wariyey Imarda Weyhi. Aali-Cimraan (42-46).

47. Waxay tidhi (Maryam) Eebow sidee Ilmo iigu ahaan isagoon i taaban Dad (Nin) wuxuu yidhi (Eebe) saasuu Alle u abuuraa wuxuu doono, markuu xukmin amarna wuxuu uun u dhahaa ahow wuuna ahaadaa.

قَالَتْ رَبِّ أَنَّى يَكُونُ لِي وَلَدٌ وَلَمْ يَمَسِّنِي بَشَرًا قَالَ
كَذَلِكَ اللَّهُ يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ إِذَا قَضَىٰ أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ
لَهُ كُنْ فَيَكُونُ ﴿٤٧﴾

48. Wuxuuna (Eebe) bari Ciise Kitaabka, Xigmad, Towreed iyo Injiil.

وَبِعِلْمِهِ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَالتَّوْرَةَ
وَالْإِنْجِيلَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaan ka dhigaynaa ku loo diray Banii' Israa'iil, (isagoo) u dhihi waxaan idiin la imid Aayad xaga Eebihiiin ka ahaatay, waxaana idiinka abuuri dhoo-bada shimbira oo kale, oo afuufi ooy noqon shimbir Idamka Eebe, waxaana bogsiiyaa indhala'aan kudhashe, Baraslaha waxaana nooleeyaa Maydka Idamka Eebe, waxaana idiin ka warrami waxaad Cunaysaan iyo waxaad ku kaydsanaysaan Guryihiinna, taasina waxay idiin tahay Calaamad haddaad rumeynaysaan (Xaqa).

وَرَسُولًا إِلَىٰ بَنِي إِسْرَائِيلَ أَنِّي قَدْ جِئْتُكُمْ بِبَيِّنَاتٍ
مِّن رَّبِّكُمْ أَنِّي أَخْلَقْتُ لَكُمْ مِنَ الطِّينِ كَهَيْئَةِ
الطَّيْرِ فَأَنفُخُ فِيهِ فَيَكُونُ طَيْرًا بِإِذْنِ اللَّهِ وَأُبْرِئُ
الْأَكْمَةَ وَالْأَبْرَصَ وَأُخِي الْمَوْتَىٰ بِإِذْنِ اللَّهِ
وَأُنَبِّئُكُمْ بِمَا تَأْكُلُونَ وَمَا تَدْخُرُونَ فِي بُيُوتِكُمْ إِنْ فِي
ذَلِكَ لَآيَاتٌ لَّكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿٤٩﴾

50. Waxaana rumeyn wixii iga horreeyey oo Tawreed ah, waxaan idiin bannayn wixii laydinka reebay Qaar-

وَمُصَدِّقًا لِّمَا بَيَّنَّتْ يَدَيَّ مِنَ التَّوْرَةِ وَلِأَجْلِ
لَكُمْ بَعْضَ الَّذِي حُرِّمَ عَلَيْكُمْ وَجِئْتُكُمْ

kiis, waxaana idiin la imid Calaamad xagga Eebihiin ka ahaatay, ee ka dhawrsada Eebe, ina adeeca.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا رَسُولَهُ

51. Ilaah waa Eebahay iyo eebihiin ee Caabuda, taasaana ah Jidka toosane.

إِنَّ اللَّهَ رَبِّي وَرَبُّكُمْ فَاعْبُدُوهُ هَذَا صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ

Aayadahan waxay ka warami Maryam iyo Wiil-keedii Ciise iyo sida eebe u siiyey iyadoon Dad taaban, una baray Kutubta ugana yeelay Rasuul Bani'iisraa'iil, Idamka Eebana wax ku bogsiiin jiray, kuna Nooleyn jiray, kagana warami jiray waxay Cuni iyo Waxay kaydsan, dhammaan waxaasina waa wax Eebe Idamkiisa ku ahaaday, ee Ciise waa un addoon Eebe, tan kale wuxuu raacay Xaqii ka horeeyey wuxuuna u baneeyey wax yaalihii laga reebay qaarkood, wuxuuna u sheegay eebihiis iyo Eebahoodba in Iiaahay yahay, oyna waajib tahay in eebaha Xaqa ah la Caabudo, saasaana ah Jidka Eebe ah ee toosan. Aali-Cimraan (47-51).

52. Markuu ka kasay Ciise Xaggooda Gaalnimo yuu yidhi yaa iigu gargaari Eebe, waxayna dhaheen Xawaariiyintii (gargaarayaashii) anagaa ah gargaaraha Eebe (Diintiisa) waxaan rumeynay Eebe ee marag ka noqo inaan Muslimiin nahay.

* فَلَمَّا أَحَسَّ عِيسَى مِنْهُمُ الْكُفْرَ قَالَ مِنْ أَنْصَارِي إِلَى اللَّهِ قَالَ الْخَوَارِجُ بَشَرًا فَاوْتُوا اللَّهَ بَشَرًا وَاللَّهُ وَاللَّهُ وَاشْهَدُوا بَأَنَّا مُسْلِمُونَ

53. Eebow waan rumeynay waxaad soo dejisay waxaana raacnay Rasuulka ee nagu qor (nagadhig) la jirka markhaatiyada, (Umadda Nabi Muxamad).

رَبَّنَا آمَنَّا بِمَا أَنْزَلْتَ وَأَتَّبِعْنَا الرَّسُولَ فَاكْتُبْنَا مَعَ الشَّاهِدِينَ

54. Way dhakreen Nabi Ciise, Allana ayaguu dhakray, Allaana u wanaagsan wax dhakra.

وَمَكْرُؤًا وَّمَكْرَ اللَّهِ وَاللَّهُ خَيْرُ الْمَكْرِيْنَ

55. Xusuuso markuu ku yidhi Eebe Ciisow waan ku oofsan waana ku koryeeli, waana kaa daahirin kuwii gaalobay, waxaana yeeli kuwa ku raaca korka kuwa Gaalobay tan iyo Qiyaamada, markaasna xaggaygaa laydiin soo celin waana idin kala Xukumi dhexdiina waxaad isku khilaafsanaydeen.

إِذْ قَالَ اللَّهُ لِعِيسَى ابْنِي مَرْيَمَ قَدْ أَخَذْنَاكَ بِآيَاتِنَا وَكَلَّمَكُنَا مِنَ الْمَوْجِئِ وَنَحْنُ فَاعِلُونَ
وَمَطَّحْنَاهُ مِنْ الدِّينِ كَفَرُوا وَجَعَلْنَا الدِّينَ
أَتْبَعُوكَ فَوْقَ الدِّينِ كَفَرُوا إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ
ثُمَّ إِلَى مَرْجِعِكُمْ فَأَخَذْنَاكُمْ بَيْنَ يَدَيْكُمْ فِيمَا كُنْتُمْ
فِيهِ تَخْتَلِفُونَ

Markuu diray Eebe Nabi Ciise waxay kala hor yimaadeen Yuhuud iyo wixii Raacay Gaalnimo, waxaase raacay gargaarayaashii (Xawaariiyintii) oo xaqa raacay Muslimiinna noqday Eebana warsaday inuu marag ka yeelo mar hadday rumeyeen xaqa raaceenna Rasuulka, kuwii kale dhagar bay faleen' Allana iyaguu dhakray (dhagarta daalimiinta mudan ku dhacdaahi waa tilmaan wanaagsan), Ciisana oofsaday daahirna ka yeelay, kuwa Muslimka ah ee xaqa dhabta ah raacana ka yeeli korka kuwa gaaloba tan

iyo Qiyaamada, markay u noqdaanna kala xukmin, xaalka Nabi Ciisena waa in loo rumeeyo sida Eebe uga waramay iyo Rasuulku, waana addoon Eebe oon mudan in awood ama Ilaahnimo lagu sheego, taasina waa doqonimo iyo Jaahilnimo daran, maxaa ka fiican in la dhaho wa addoon Eebe doortay oo Nabi ah, mana dhaafsiisna Nabinimo iyo Rasuulnimo. Wakaas xaqu. Aali-Cimraan (52-55).

56. Kuwa Gaaloobase waxaan Cadaabi, cadaab daran Adduun iyo Aakhiraba, mana helaan gargaare.

فَأَمَّا الَّذِينَ كَفَرُوا فَعَذَابُهُمْ عَذَابًا شَدِيدًا فِي
الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَمَا لَهُمْ مِنْ نَاصِرِينَ ﴿٥٦﴾

57. kuwa (Xaqa) rumeeyeyse oo camal fiican falay wuxuu u oofin (dhammayn Eebe) ajirkooda, Eebana ma jecla daalimiinta.

وَأَمَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَيُوَفِّيهِمْ
أُجُورَهُمْ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ الظَّالِمِينَ ﴿٥٧﴾

58. kaasaan ku akhriyeynaa korkaaga oo aayaad ah iyo xus (Quraan) xigmo leh.

ذَٰلِكَ تَتْلُوهُ عَلَيْهِمْ مِنَ الْآيَاتِ وَالذِّكْرِ
الْحَكِيمِ ﴿٥٨﴾

59. Tusaalaha Ciise Eebe agtiisa waa sida (Nabi) aadam, Eebaa ka Abuuray Carro markaasuu u yidhi ahow wuuna ahaan.

إِنَّمَا مَثَلُ عِيسَىٰ عِنْدَ اللَّهِ كَمَثَلِ آدَمَ إِذْ خَلَقَهُ
مِنْ تُرَابٍ ثُمَّ قَالَ لَهُ كُنْ فَيَكُونُ ﴿٥٩﴾

60. Xaqu Eebahaa buu ka ahaaday ee ha noqonin kuwa shakiya.

الْحَقُّ مِنْ رَبِّكَ فَلَا تَكُنْ مِنَ الْمُمْتَرِينَ ﴿٦٠﴾

61. ee ruuxii kugula dooda intuu kuu yimid Cilmi ka dib waxaad dhahdaa kaalaya aan u yeedhno Caruurtannada iyo Caruurtiinna iyo Haweenkannaga iyo Haweenkiinna iyo Naftanna iyo Naftiinna markaas aan baryootanno oon lacanadda Eebe kor yeello Beenaalayaasha.

فَمَنْ حَاجَّكَ فِيهِ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَكَ مِنَ الْعِلْمِ فَقُلْ
تَعَالَوْا نَدْعُ أَبْنَاءَنَا وَأَبْنَاءَكُمْ وَنِسَاءَنَا
وَنِسَاءَكُمْ وَأَنْفُسَنَا وَأَنْفُسَكُمْ ثُمَّ نَبْتَهِلْ فَنَجْعَلْ
لَعْنَتَ اللَّهِ عَلَى الْكٰذِبِينَ ﴿٦١﴾

Waxaa ka mid ah usluubka Quraanka inuu isla sheego had iyo jeer kuwa wanaagsan iyo abaalkooda iyo kuwa xun iyo waxay muten, tan kale abuurka (Nabi) Ciise wuxuu u egyahay kii Nabi Aadam xagga Aabbo la'aanta, iyo in Eebe siduu doono wax u abuurto wax la shakiyana ma ahayn, waxaana jidaysan in ciddii Xaqa ku doodad intuu cadaaday lala habaartamo, Aayaduhuna waxay soo dagaan mar wafdi Gaalada nasaarada ah ka yimid xagga Najraan ayna ku murmeen xaalka Nabi Ciise, waxayna ka Cabsadeen inay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ay la habaartamaan, maxaa yeelay way sii khasaari lahaayeen. Aali-Cimraan (56-61).

62. Kaas (Quraanka) unbaa Qisooyin Xaq ah, Allaah mooyee macbuud kaloo xaqa ma jiro, Eebana waa adkaade falsan.

إِنَّ هٰذَا لَهُوَ الْقَصَصُ الْحَقُّ وَمَنْ إِلٰهٌ إِلَّا اللَّهُ وَان
اللَّهُ لَهُ الْعَرْشُ الْحَكِيمُ ﴿٦٢﴾

63. Hadday jeedsadaan Gaaladuna

فَإِنْ تَوَلَّوْا فَإِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ بِالْمُفْسِدِينَ ﴿٦٣﴾

Eebe waa ogyahay kuwa wax fasahaadiya.

64. Waxaad dhahdaa Nabiyoow Ehelu Kitaabow u kaalaya kalimo (odhaah) aan u simanahay aniga iyo adinkaba oo ah inaynaan caabudin Eebe mooyee, (wax kale) oynaan lana wadaajin waxba kana yeelan qaarkeen qaar Eebayaal, Hadday jeedsadaanna waxaad dhahdaa marag noqda inaan Muslimiin nahay.

قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ تَعَالَوْا إِلَى كَلِمَةٍ سَوَاءٍ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ أَلَّا نَعْبُدَ إِلَّا اللَّهَ وَلَا نُشْرِكَ بِهِ شَيْئًا وَلَا يَتَّخِذَ بَعْضُنَا بَعْضًا أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَقُولُوا اشْهَدُوا بِأَنَّا مُسْلِمُونَ ﴿٦٤﴾

65. Ehelu Kitaabow maxaad ugu murmaysaan (Nabi) Ibraahim, Tawreed iyo Injiilba lama soo dejin gadaashiisa mooyee, meysaan wax kasayn.

يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لِمَ تُحَاجُّونَ فِي إِبْرَاهِيمَ وَمَا أُنزِلَتْ التَّوْرَةُ وَالْإِنْجِيلُ إِلَّا مِنْ بَعْدِهِ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٦٥﴾

Quraanka u unbaa Qisooyin Xaq ah ku suganyihiin, Allaah mooyee ku xaq lugu caabudaa ma jiro, waana adkaade faslan, ciddii Xaqa ka jeedsatana Eebe waa ogyahay iyo fasaadiyaasha, Xaqana cidna gaar uma laha ee waa loo simanyahay, sidoo kale Cibaadada Eebe iyo inaan qaar qaar ka kale ka Eebe yeelanin kuna raacin qalooc, Ciddii Xaqa ka jeedsatana ha ogaato inaan anagu Mu'miniin-nahay, Yuhuud iyo Nasaarana ma aha inay ku murmaan in Nabi Ibraahim ka mid ahaa, illeen Tawreed iyo Injiilba waxaa la soo dajiyey gadaashiye, Bukhaari waxaa ku sugnaaday in Abuusufyaan u galay Qaysarkii Ruum, markaas warsaday Qaysar Nabiga tilmaantiisa, Nasabkiisa, wuxuu u yeedhi iyo Runtiisa markuu u wada sheegayna uu yidhi waa sidaas Nabiyada tilmaantoodu. Aali-Cimraan (62-65).

66. Kuwanow (Yuhuud iyo Nasaaro) waxaad ku muranteen waxaad wax ka ogtihiin ee maxaad ugu murmeysaan waxaydaan Cilmi u lahayn, Eebaa og idinkuse wax ma ogidiin.

هَآئِنْتُمْ هَآؤِلَآءِ حَاجَجْتُمْ فِيمَا لَكُمْ بِهِ عِلْمٌ فَلِمَ تُحَاجُّونَ فِيمَا لَيْسَ لَكُمْ بِهِ عِلْمٌ وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿٦٦﴾

67. Ma aha (Nabi) Ibraahim Yuhuud iyo Nasaara (midna) waase toosane Muslim ah kana mid ma aha Mushriikiinta (Gaalada).

مَا كَانَ إِبْرَاهِيمَ يَهُودِيًّا وَلَا نَصْرَانِيًّا وَلَكِنْ كَانَ حَنِيفًا مُسْلِمًا وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿٦٧﴾

68. Waxaa Dadka ugu mudan (Nabi) Ibraahim kuwii raacay iyo Nabigan (Muxamad ah) iyo kuwa (Xaqa ru-meeyey) Eebana waa Waliga (Gargaare) Mu'miniinta.

إِنْ أَوْلَى النَّاسِ بِإِبْرَاهِيمَ لَلَّذِينَ اتَّبَعُوهُ وَهَذَا النَّبِيُّ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَاللَّهُ وَلِيُّ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٦٨﴾

69. Waxay jeclaatay koox ka mid ah Ehelu Kitaabka inay idin baadiyeeyaan, mana baadiyeeyaan waxaan Naftooda ahayn, mana kasayaan.

وَدَدَ طَائِفَةٌ مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ لَوْ يُضِلُّوكُمْ وَمَا يُضِلُّونَ إِلَّا أَنْفُسَهُمْ وَمَا يَشْعُرُونَ ﴿٦٩﴾

70. Ehelu Kitaabow maxaad uga Gaaloobaysaan Aayaadka Eebe idinkoo marag ah (og xaqnimadeeda).

يٰٓأَهْلَ الْكِتٰبِ لِمَ تَكْفُرُونَ بِآيٰتِ اللّٰهِ وَآيٰتِهِ
تَشْهَدُونَ ﴿٧٠﴾

71. Ehelu Kitaabow maxaad ugu Khaldaysaan Xaqa baadil (Xumaan) oo u qarineysaan xaqa idinkoo og.

يٰٓأَهْلَ الْكِتٰبِ لِمَ تَلْفُسُونَ الْحَقَّ بِالْبَاطِلِ وَتَكْفُرُونَ
الْحَقَّ وَآيٰتِهِ تَعْمٰوْنَ ﴿٧١﴾

Yuhuud iyo Nasaara iyo Gaalada kalaba ma daayaan muran iyo dood, waxay ku murmaan waxayan waxba ka ogayn, sida xaalka Nabi Ibraahim, Nabi Ibraahimna ma ahayn Yuhuud iyo Nasaara midna, wuxuuse ahaa Muslim toosan, oon Gaalada wax ka dhexeeynin, waxaana ugu dhaw Dadka intii raacday iyo Nabiga Muxamad ah iyo Mu'miniinta, Eebana waa gargaaraha Mu'miniinta, waxayna dooni Ehelu Kutaabku (Yuhuud iyo Nasaara) qaarkood inay idin dhumiyaan, Naftooda unbayse dhumin mase oga, hadday ka Gaaloobaan Aayaadka Eebe ama Xaqa iyo Xumaanta isku khaldaan ama Xaqa qariyaan iyaga unbay dhibi.

Cabdullaahi Binu Mascuud waxaa laga wariyey in Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi Nabi kasta wuxuu leyahay Sokeeye Nabiyada ka mid ah Sokeeyahayguna waa aabbahay, jeclaha Eebe, Nabi Ibraahim korkiisa nabadgalyo ha ahaatee. Aali-Cimraan (66-71).

72. Waxay dhaheen koox ka mid ah Ehelu Kitaabka rumeeya waxa lagu soo dajiyey kuwa (Xaqa) rumeeyey (Quraanka) Maalinta horteeda kana gaalooaba maalinta gadasheeda waxay u dhawyihiin Mu'miniintu inay noqdaane (Gaalooabaan).

وَقَالَتَ ظٰلِمَةٌ مِّنْ اَهْلِ الْكِتٰبِ ءَامِنُوْا بِالَّذِيْ اَنْزَلَ
عَلَى الْاٰدِيْنَ ءَامِنُوْا وَجِهَ النَّهَارِ وَاُكْفُرُوْا ءَاخِرَةً
لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُوْنَ ﴿٧٢﴾

73. Hana aaminina (rumeynina) ruuxaan Diintiinna raacin, waxaad dhahdaa Hanuun waa hanuunka Alle, Xasad aad Xasdeysaan, in la siiyo cid wax la mid ah waxa laydin siiyey ama idinkula doodaan Eebihii agtiisa, waxaad dhahdaa Fadligu gacanta Eebe yuu ku suganyahay wuxuuna siiyaa Cidduu doono, Eebana waa waasac (deeq badane) og.

وَلَا تُؤْمِنُوْا اِلَّا لِمَنْ تَجْعَلُ دِيْنَكَ قُلُوْبًا اَلْهَدٰى
هُدٰى اللّٰهُ اَنْ يُؤْتِيَ اَحَدًا مِّثْلَ مَا اُوْتِيَ سِئْرًا اَوْ يُحَاجُّوْكُمْ
عِنْدَ رَبِّكُمْ قُلُوْبًا اِنْ اَلْفَضْلُ بِيْدِ اللّٰهِ يُؤْتِيْهِ مَن يَّشَآءُ
وَاللّٰهُ وٰسِعٌ عَلِيْمٌ ﴿٧٣﴾

74. Wuxuuna ku gaaryeelaa Naxariistiisa cidduu doono, Eebaana iska leh Fadliga Wayn.

يَخْتَصُّ بِرَحْمَتِهِ مَن يَّشَآءُ وَاللّٰهُ ذُو الْفَضْلِ
الْعَظِيْمِ ﴿٧٤﴾

Gaaladu had iyo jeer waa colka Muslimiinta, halkanna waxaad ku arkeysaan Akhlaaq xumadooda iyo khayaamadooda, iyagoo is faray inay isu muujiyaan niska hore Muslimiin, niska dambana muujiyaan Gaalnimo, si ay Muslimiinta ugu beeraan shaki iyo walaac, una dhahaan kuwii Cilmiga lahaa ee rumeeyey niskii hore waa kuwaa ka baxeen niskii dambana, waxay kalooyi is faareen inayna aaminin ruuxaan iyaga raacin Xasad iyo Xumaan darteed, Eebaase iska leh fadliga iyo wanaaga siinna cidduu

doono, Naxariistiisana ku khaasyeeli cidduu doono oo Mu'miniinta ah, illeen waa deeq badanee, taasina waxay inooga digi Gaalada iyo dhagartooda iyo niyad xumaantooda iyo in laga foojignaado. Aali-Cimraan (72-74).

75. Ehelu Kitaabka waxaa ka mid ah Ruux Haddaad ku Aaminto Xoolo badan ku siin (Nasaarada Qaarkeed) waxaana ka mid ah mid haddaad ku Aaminto Diinaar aan ku siinaynin, inaad kor taagnaato mooyee (waa Yuhuudda iyo wixxi la mid ah) waxaana ugu wacan Arrintaas inay dhaheen naguma laha Umiyiintu Jid, waxayna ku dhihi Eebe Been iyagoo og.

﴿ وَمَنْ أَهْلَ الْكِتَابِ مَنْ إِنْ تَأْمَنَهُ بِقِنطَارٍ يُؤَدُّهُ إِلَيْكَ وَمِنْهُمْ مَنْ إِنْ تَأْمَنَهُ بِدِينَارٍ لَّا يُؤَدُّهُ إِلَيْكَ إِلَّا مَا دُمْتَ عَلَيْهِ قَائِمًا ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَالُوا لَيْسَ عَلَيْنَا فِي الْأُمِّيَنَ سَبِيلٌ وَيَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ الْكِبْرُ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٧٥﴾

76. Saas ma aha ee ruuxii oofiya Ballankiisa oo Dhawrsada Eebe waa Jecelyahay Dhawrsadayaasha.

﴿ بَلَىٰ مَنْ أَوْفَىٰ بِعَهْدِهِ وَاتَّقَىٰ فَإِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ ﴿٧٦﴾

77. Kuwa ku Gata Ballankii Eebe iyo Dhaartoodii Lacag (Qiimo) yar kuwaa-su Nasiib kuma laha Aakhiro, lamana hadlo Eebe (si Naxariis ah) mana dayo Xaggooda Maalinta Qiyaame, mana Daahiriyo, waxayna mudan Cadaab daran.

﴿ إِنَّ الَّذِينَ يَشْرُونَ بِعَهْدِ اللَّهِ وَأَيْمَانِهِمْ ثَمَنًا قَلِيلًا أُولَٰئِكَ لَأَخْلَقَ لَهُمْ فِي الْآخِرَةِ لَوْلَا يَكْفُهُمْ اللَّهُ وَلَا يَنْظُرُ إِلَيْهِمْ يَوْمَ الْفِتْمَةِ وَلَا يُرَكِّبُهُمْ وَلَا يُعَذِّبُ أَلِيمٌ ﴿٧٧﴾

Ehelu Kitaabkii Yuhuud iyo Nasaara waxaa ka mid ahaa kuwo Haddaad waxbadan ku Aaminto kuu soo Celiya sida kuwii Islaamay ama Nasaarada Qaarkeed, waxaase ka mid ah kuwo aan hal diinaar Haddaad ku Aaminto aan ku siineyn inaad kor joogto mooyee sida Yuhuudda oo dhihi Xaq naguma leh Muslimiintu Beenna Eebe ku sheega iyagoo wax og, waxaase Eebe jecelyahay kuwa Oofiya Ballanka oo dhawrsada, Ciddiise ku gadata Ballanka Eebe iyo dhaartiisa Xoolo waa Midaan Nasiib ku lahayn Aakhiro oon Naxariis Eebana helayn Qiyaamada Cadaab daranna u sugnaaday. Rasuulkuna wuxuu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) Ruuxii ku Goosta Xoolo Ruux Muslim ah Xaq darro dhaar wuxuu la kulmaa Eebe isagoo u Cadhaysan. (Imaam Axmed) taasina waxay ku tusin in layska dhawro Xaqa Dadka oon Xaq darro lagu Cunin, Haddii kale ha sugo Halaag iyo Ciqaab. Aali-Cimraan (75-77).

78. Waxaa ka mid ah (Yuhuudda) Koox ku Leexisa Carraabkooda Kitaabka (Quraanka) si aad ugu malaysaan Kitaabka, kana mid ma aha Kitaabka waxayna odhan Isagu wuxuu ka ahaaday Eebe agtiisa kamana ahaanin Eebe agtiisa, waxayna ku dhihi Eebe Been iyagoo og.

﴿ وَإِنَّ مِنْهُمْ لَفَرِيقًا يَلْعُونُ أَلْسِنَتَهُم بِالْكِتَابِ لِتَحْسَبُوهُ مِنَ الْكِتَابِ وَمَا هُوَ مِنَ الْكِتَابِ وَيَقُولُونَ هُوَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَمَا هُوَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَيَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ الْكِبْرُ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٧٨﴾

79. Kuma haboona Dad in Eebe siiyo

﴿ مَا كَانَ لِشَيْءٍ أَنْ يُوْتِيَهُ اللَّهُ الْكِتَابَ وَاللَّهُ عَزِيزٌ

Kitaab, Xukun iyo Nabinimo markaas ku dhaha Dadka Addoomo ii noqda Eebe ka sokow, hasayeeshee noqda Culimo (Dabeeco fiican) Kitaabkaad baraysaan dartiis iyo waxaad baranaysaan.

وَالنَّبِيُّ تَمَّ يَقُولُ لِلنَّاسِ كُفُّوا عِزَادَاتِي مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلَكِنْ كُفُّوا رَبِّئِنَّيَ يَمَا كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ
الْكِتَابَ وَيَمَا كُنْتُمْ تَدْرُسُونَ ﴿٧٤﴾

80. Idinmana farayo Eebe inaad ka yeelataan Malaa'igta iyo Nabiyada Eebayaal, ma wuxuu idin fari Gaalnimo intaad Muslim noqoteen ka dib.

وَلَا يَأْمُرُكُمْ أَنْ تَتَّخِذُوا الْمَلَائِكَةَ وَالنَّبِيِّينَ أَرْبَابًا أَيَأْمُرُكُمْ بِالْكَفْرِ بَعْدَ إِذْ أَنْتُمْ مُسْلِمُونَ ﴿٨٠﴾

Yuhuud waxaa Caadadeeda ka mid ah Xaq diido iyo Hadal Leexin, waxaana ka mid ah kuwo badala Hadalka Eebe oo Waji kale u yeela si ay Dadkaan wax aqoonin ugu khaldaan, iyagoo dhihi wuxuu ka soo dagay xagga Eebe, kamana imaan xagga Eebe ee waa been ay ogyihin. Diinta Islaamkuna ma ogola in Cid'aan Eebe ahayn la caabudo ama Addoon loo noqdo aad Caabudid, waase in la noqdaa Culimo toosan marba haddaad Kitaabka Akhriyeysaan ama baranaysaan, Eebana ma faraayo in laga yeesho Malaa'igta iyo Nabiyada Ilaahyo, Eebana Gaalnimo ma faraayo Cidna, waxayna soo degtay Aayaduhu mar Gaalo Yuhuud iyo Nasaara ah ku dhaheen Nabiga ma waxaad noogu yeedhi inaan ku Caabudno sidii Ciise loo Caabuday, oo Nabigu yidhi: Eebaan ka magangalay inaan Caabudo wax ka soo hadhay, Daxaagna wuxuu yidhi: Waxaa Xaq ku ah ruuxii Quraan baran inuu Faqiih ahaado. Aali-Cimraan (78-80).

81. (Xusuuso) markuu ka qaaday Eebe Ballan adag Nabiyada waxaan idinsiyo oo. Kitaab iyo Xigmo ah markaas idiin yimaado Rasuul rumeyn waxaad hay-sataan waa inaad rumeysaan una gargaartaan, kuna yidhi (Eebe) Ma qirteen oo ma qaadeen Arrintaas Ballankeyga ah oo dheheen waan qirnay (ogolaanay) markaas ku yidhi Marag ka noqda Anna la jirkiina yaan ka mid noqon kuwa marag kici.

وَإِذْ أَخَذَ اللَّهُ مِيثَاقَ النَّبِيِّينَ لَمَا آتَيْنَاكُمْ مِنْ كِتَابٍ وَحِكْمَةٍ ثُمَّ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مُصَدِّقٌ لِمَا مَعَكُمْ لَتُؤْمِنُنَّ بِهِ وَلَتَنْصُرُنَّهُ قَالَ أَأَقْرَضْتُمْ
وَأَخَذْتُمْ عَلَىٰ ذَٰلِكُمْ إِصْرِي قَالُوا أَقْرَبْنَا قَالَ
فَأَشْهَدُوا وَأَنَا مَعَكُمْ مِنَ الشَّاهِدِينَ ﴿٨١﴾

82. Ruuxiise jeedsada intaas ka dib kuwaasi waa kuwo Faasiqiin ah.

فَمَنْ قَوْلِي بَعْدَ ذَٰلِكَ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴿٨٢﴾

83. Ma Diinta Eebe waxaan ahayn yey rabaan isagoo u hogaansamay waxa Samaawaadka iyo dhulka ku sugan ogolaan iyo ikraahba Xaggiisaana loo Celin (Dadka).

أَفَغَيْرَ دِينِ اللَّهِ يَبْعُوثُ وَاللَّهُ أَسْمَأَمَنْ فِي
السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ طُوعًا وَكَرْهًا وَأَلَيْهِ
يُرْجَعُونَ ﴿٨٣﴾

84. Waxaad dhahdaa waxaan rumaynay Eebe iyo waxa nalagu soo dajiyey iyo waxa lagu soo dajiyey (Nabi) Ibraahim,

قُلْ ءَأَمَنَّا بِاللَّهِ وَمَا أُنزِلَ عَلَيْنَا وَمَا أُنزِلَ عَلَيْنَا
إِنْبِرَاهِيمَ وَإِسْمَاعِيلَ وَإِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ

Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub, Faracyadii, wixii la siiyey Muuse, Ciise iyo Nabiya-dii Xagga Eebahood kala bixin mayno dhexdooda Anaguna Eebaan u hogaan-sameynaa.

وَالْأَسْبَاطِ وَمَا أُوتِيَ مُوسَىٰ وَعِيسَىٰ وَالنَّبِيُّونَ مِنْ رَبِّهِمْ لَا نُفَرِّقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِنْهُمْ وَنَحْنُ لَهُمْ مُسْلِمُونَ ﴿٨٥﴾

85. Ruxii doona Diin aan Islaamka ahayn laga aqbali maayo, Aakhirana wuxuu noqon kuwa khasaaray.

وَمَنْ يَبْتَغِ غَيْرَ الْإِسْلَامِ دِينًا فَلَنْ يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِي الْآخِرَةِ مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٨٥﴾

Waxay Aayaduhu Cadayn in Eebe Ballan adag ka qaaday Nabiyaada inay Isrumeeyaan isuna gargaaraan, Siduu Ballan uga qaaday in hadday haleelaan Nabiga Muxamed ah u rumeeyaan uguna gargaaraan, ayna aqbaleen Ciddii ka leexatana ay Xumaan, Xaqna ma aha in waxaan Diinta Islaamka ahayn la doono, illee Eebaa wax kastaa u hogaansamaye waana in la rumeeyo Nabiyaada Eebe dhamaantood lana kala saarin, Diinaan Islaamka ahayn Ruuxii doonana wax lagama aqbalo wuuna khasaari Aakhiro, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ruuxii Camal fala waxaan haysanno waxaan ahayn waa lagu Celin. Waa Saxiix. Aali-Cimraan (81-85).

86. Sidee u Hanuunin Eebe Qoom Gaaloobay rumayn ka dib, oo qiray in Rasuulku Xaq yahay una Yimaadeen Xujooyin, Eebana ma hanuuniyo Qoom Daalimiin ah.

كَيْفَ يَهْدِي اللَّهُ قَوْمًا كَفَرُوا بَعْدَ إِيمَانِهِمْ وَشَهِدُوا أَنَّ الرَّسُولَ حَقٌّ وَجَاءَهُمُ الْبَيِّنَاتُ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴿٨٦﴾

87. Kuwaas abaalkoodu waa Lacnad Eeboo korkooda ah iyo Malaa'igta iyo Dadka Dhammaantiis.

أُولَئِكَ جَزَاءُهُمْ أَنْ عَلَيْهِمْ لَعْنَةُ اللَّهِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالنَّاسِ أَجْمَعِينَ ﴿٨٧﴾

88. Wayna ku waari (Ciqaatbtooda) dhexdeeda lagamana fududeeyo Cadaabka lamana Sugo.

خَالِدِينَ فِيهَا لَا يُخَفَّفُ عَنْهُمُ الْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٨٨﴾

89. Kuwo Toobad keena intaas ka dib mooyee oo wanaajiya Eebana waa dambi dhaafe Naxariista.

إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَأَصْلَحُوا فَإِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٨٩﴾

90. Kuwa Gaalooba rumayn ka dib, markaas kororsada Gaalnimo lagama aqbalo Toobadooda kuwaasina waa kuwa Dhumay.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا بَعْدَ إِيمَانِهِمْ تَزَادُوا كُفْرًا لَنْ نُقَبِّلَ تَوْبَتَهُمْ وَأُولَئِكَ هُمُ الضَّالُّونَ ﴿٩٠﴾

91. Kuwii Gaaloobay oo dhintay iya-goo Gaalo ah lagama aqbalo mid ka mid ah Dhulka Muggii oo Dahab ah hadduu isku furto, kuwaasina waxaa u sugnaaday Cadaab daran wax u gargaarana ma leh.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَمَاتُوا وَهُمْ كُفَرَاءَ فَلَنْ يُقْبَلَ مِنْ أَحَدِهِمْ شَيْءٌ مِنَ الْأَرْضِ ذَهَبًا أَوْ لَوِ افْتَدَىٰ بِهِ ۗ أُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ وَمَا لَهُمْ مِنْ نَاصِرِينَ ﴿٩١﴾

Eebaan ka Magangallay Dhumid Hanuun ka Dib. Waxay soo dageen Aayaduhu mar Nin reer Madiina ahaa Islaamay haddana Gaalnimu u noqday haddana Qoomameeyay oo Cid uu warsaday inuu Toobadleeyahay iyo in kale, wuxuuna mudan ruuxii Islaanimu ka dib Laabta Cigaab daran oo uu ku waari, Cidiise Toobadkeenta wuu ka aqbali Eebe una dhaafi Dambiga 'Cidiise ku sii Madax adaygta Gaalnimada oo sii korarsata Toobad lagama Aqbalo wayna Baadiyoobeen, Cidii Saas ku dhimatana lagama aqbalo Dhulka Mugis oo Dahab ah hadduu isku furto, wuxuuna mudan Cadaab daran, wax u gargaarina ma jiro.

Waxaa sugnaaday in mid Ehelu Naarka ah loo dhihi Qiyaamada ka warran haddaad leedahay waxa Dhulka ku sugan maysku furan lahayd markaasuu dhihi: Haa, markaasuu Eebe dhihi wax ka fudud yaan kaa doonay oo ballan kaaga qaaday Duudkii Nabi Aadam waa inaan ii Shariig yeelin (Ila Caabudin wax kale) waadna diiday Gaalnimu mooyee, (Basaar). Aali-Cimraan (86-91).

92. Ma gaadhaan sama fal intaad wax ka bixisaan waxaad jeceshihiin, waxaad bixisaana Eebe waa ogyahay.

لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا حُبَبْتُمْ وَمَا تَنْفِقُوا مِنْ شَيْءٍ فَإِنَّ اللَّهَ بِهِ عَلِيمٌ ﴿٨٦﴾

93. Cuntada dhamaanteed xalaal bay u ahayd Baniisraa'iil wuxuu ka reebay Israa'iil Naftiisa mooyee, soo degidii Tawreed ka hor waxaad dhahdaa keena Tawreed oo Akhriya haddaad runlow tihiin.

*كُلُّ الطَّعَامِ كَانَ حَلَالًا لَيْسَ إِسْرَائِيلَ إِلَّا مَا حَرَّمَ إِسْرَائِيلُ عَلَى نَفْسِهِ مِنْ قَبْلِ أَنْ تُنَزَّلَ التَّوْرَةُ فَمَنْ قَاتُوا فِي التَّوْرَةِ قَاتَلُوهَا إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٨٧﴾

94. Ruuxii ku been abuurta Eebe korkiisa intaas ka dib kuwaasu waa uun Daalimiin.

فَمَنْ أَفْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿٨٨﴾

95. Waxaad dhahdaa Runbuu sheegay Eebe, ee raaca Milladda Ibraahiim (Jidkiisii) isagoo toosan, kamana mid ahayn Mushrikiinta.

فَلْصَدَقَ اللَّهُ فَاتَّبِعُوا مِلَّةَ إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿٨٩﴾

Aayaddu waxay Caddayn inaan Wanaagga dhabta ah la gaadhayn inta laga bixiyo waxa la jecelyahay Qaarkiis, markay Aayaddu soo degtay yaa Abuu Dhalxa Beertiisii Sadaqaystay, markaasaa Nabigu faray (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Qaraabadiisa ku Sadaqaysto, markaasuu u qaybiyey. Tan kale waxay ahayd Yuhuud tahayna Xaq diidayaal Warsi iyo Xujo badan waxayna Nabiga Warsadeen wixii ka Reebanaa Israa'iil oo Cunno ahaa, wuxuuna Eebe u sheegay in Cunadu Xalaal u ahayd wuxuu isagu is ka reebay mooyee, Tawreed ka hor, ee ha akhriyeen Tawreed hadday run sheegi, Cidiise Been abuurta waa Daalimad, Eebana Run buu sheegay ee halla raaco Wadadii nabi Ibraahim oo ah Diinta Islaamka ah, Gaalana wax isuma ahayn nabi Ibraahim.

Ibn Cabaas wuxuu yidhi: Israa'iil "waa Yacquub" 'wuxuuna ku Nadray Hadduu Eebe Caafiyo Inuusan Cunin Xubnaha Qaarkood isaga iyo Caruurtiisu. Aali-Cimraan (92-95).

96. Guriga ugu horreeyey ee loo soo dejiyey Dadka waa kan Maka (Kacba-da) waana barakaysanyahay waana Hanuunka Caalamka.

إِنَّ أَوَّلَ بَيْتٍ وُضِعَ لِلنَّاسِ لَلَّذِي بِبَكَّةَ مُبَارَكًا وَهُدًى لِّلْعَالَمِينَ ﴿٩٠﴾

97. Waxaa ku sugan Aayaad Cad Cad

فِيهِ آيَاتٌ بَيِّنَاتٌ مِّمَّا أَنْزَلْنَا وَإِبْرَاهِيمَ وَمَنْ دَخَلَهُ.

Maqqaamu Ibraahiimna (waa ku yaal) Ruuxii galana wuxuu ahaan Aamin, Eebana wuxuu ku leeyahay Dadka Xajka Baydka Ruuxii kara Wadada, Ruuxii Gaaloobana Eebe waa ka kaaf-toonyahay Caalamka.

كَانَ إِبْرَاهِيمُ عَلَىٰ النَّاسِ حَنِيعًا ۖ لِيُوَفِّيَهُمْ آلَهُمْ بَيْتًا إِذْ أَدْبَرُوا مُدْبِرِينَ ﴿١٧٧﴾

98. Waxaad dhahdaa Ehelu Kitaabow maxaad uga Gaaloobaysaan Aayaadka Eebe, isagoo Eebana Marag u yahay waxaad Camal falaysaan.

قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لَا تَكْفُرُوا بِآيَاتِ اللَّهِ وَأَنَّ اللَّهَ شَهِيدٌ عَلَىٰ مَا تَعْمَلُونَ ﴿١٧٨﴾

99. Ehelu Kitabow maxaad uga Celinaysaan Jidka Eebe Ruuxii Rumeyn idinkoo la dooni (Xaqa) Qallooc idinkoo marag ah Eebana ma halmaansana waxaad Falaysaan.

قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لِيَرْضَدُوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ مِنْ أَمْنٍ تَغْنُوثَهَا وَعُجَا وَأَنْتُمْ شُهَدَاءُ ۗ وَمَا اللَّهُ بِغَفِيلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١٧٩﴾

Eebe wuxuu sheegi in Guriga ugu horeeyey in Eebe lagu Caabudo uu yahay Kacbada 'Eebana waa sharifay Baydkaas iyo Masaajidka barakaysan ee Maka, waxaana ku sugan Aayado waa weyn oo ka mid yahay Maqaamu Ibraahiim, Ciddii Gashana waa Aamin, Eebana Dadka wuxuu ku waajibiyeey Ciddii karta inay u Xajiyaan Baydkaas, Ciddii iska diida isagoo karana Eebe waa ka kaaf-toonyahay Gaalo. Abuudar waxaa laga wariyey inuu yidhi: Waxaan idhi: Rasuulka Allow Masaajidkee u horeeyey? markaasuu yidhi Masaajidka Xurmaysan (ee Maka) waxaan idhi yaa ku xiga? waxuu yidhi Masaajidka Aqsa (ee Qudsi) waxaan idhi imisaa u dhaxaysay? wuxuu yidhi Afartan, waxaan idhi yaa ku xigay? wuxuuna yidhi Meejii Saladi kugu haleeshaba ku tuko dhamaan waa Masaajide (Imaam Axmed) yuhuud iyo Nasaarana Xaqay ka gaaloobi iyagoo arka, kana leexin Dadka, ayna Ceebayni oo Qalloocin, waana wax la yaab leh inay saasu Caado u tahay. Maantadan aan joogno waxay Muslimiinta iyo Diinta Islaamka ku hayaan wax la helmaami karo ma aha. Aali-Cimraan (96-99).

100. Kuwa (Xaqa) rumeeyow Haddaad Adeecdaan (Maqashaan) Koox ka mid ah kuwa la Siiyey Kitaabka (yuhuud iyo Nasaara) waxay idiin Celin Iimaankiinna ka dib Gaalnimo.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِن تَطِيعُوا أَمْرًا مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ يَرُدُّكُمْ وَعَدَّ إِيمَانَكُمْ كُفْرًا ﴿١٨٠﴾

101. Seed u Gaaloobaysaan idinkoo laydinku kor Akhrin Aayaadka Eebe Dhexdiinnana Joogo Rasuulkiisii, ruuxii Cuskada Eebe (oo ka dhawrsada) waxaa lagu hanuuniyey Jidka Toosan.

وَكَيْفَ تَكْفُرُونَ وَأَنْتُمْ تُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ آيَاتُ اللَّهِ وَفِيكُمْ رَسُولُهُ ۗ وَمَنْ يَعْتَصِم بِاللَّهِ فَقَدْ هُدِيَ إِلَىٰ صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿١٨١﴾

102. Kuwa (Xaqa) rumeeyow ka dhawrsada Eebe dhawrsashadiisa Xaqa ah, hana dhimanina idinkoon Muslim ahayn.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ حَقَّ تَقَاتِهِ ۖ وَلَا تَمُوتُوا إِلَّا وَأَنْتُمْ مُسْلِمُونَ ﴿١٨٢﴾

103. Qabsada Xadhigga Eebe (Islaamka) dhamaantiin hana kala tagina, xusana Nicmada Eebe ee korkiinna ah, markaad Col ahaydeen oos isu Dumay Quluubtiinna ood Noqoteen Nicmada Eebe darteed Walaalo, idinkoo ahaa Qar God Naar ah, oos idinka koriyey Xaggeeda, saasuu idiinku Cadayn Eebe Aayaadkiisii si aad u Hanuuntaan.

وَأَعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا وَاذْكُرُوا نِعْمَتَ اللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ كُنْتُمْ أَعْدَاءً فَأَلَّفَ بَيْنَ قُلُوبِكُمْ فَأَصْبَحْتُمْ بِنِعْمَتِهِ إِخْوَانًا وَكُنْتُمْ عَلَى شَفَا حُفْرَةٍ مِنَ النَّارِ فَأَنْقَذَكُمْ مِنْهَا كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٠٣﴾

Eebe wuxuu sheegay in hadday Mu'miniintu maqlaan warka Gaalada ay Xasdi Jidka Xaqa ahna ka leexin, maxaa yeelay Gaaladu waa Colka Mu'miniinta waxayna ku dadaali say u Gaalayn lahaayeen, mana haboona in la Gaaloobo iyadoo Xaqa la haysto oo Cad yahay, tan kale waa in Eebe la Cuskadaa, Cibaado dhab ahna la Caabudaa, Muslimimana lagu dhintaa, lana Qabsado dhammaan Xadhigga Eebe oon lana kala tagin. Lana Xusuusnaado sida Eebe isugu soo Dumay Qalbiga Muslimiinta iyadoo Col ahaan Jiray, ku Dhucid Naareedna u dhawaa kana koriyey, una Cadeeyay Aayaadka Eebe si ay u Hanuunaan. Waxaa Sugnaatay: Dhawrsashada Eebe waa in la Adeecoon la Caasiyin, laguna Mahdiyyaa lagana Gaaloobin lana Xusoo la Halmaamin (Xaakim) *Tilmaanta Quraankana waxaa ka mid ah: Inuu yahay Xadhigii Eebe ee Adkaa iyo Jidkiisii Toosnaa, waxaase loo baahanyahay Walaalnimo, Isku duubnaa, Xaq raacid, Gaalo ka digtoonaan iyo Toosnaa. Aali-Cimraan (100-103).

104. Ha laydinka helo Umad u yeedha Khayrka oo fari Wanaagga oo ka reebta waxa la Naco (Xumaanta) ku-waasina waa uun kuwa Liibaanay.

وَلَتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿١٠٤﴾

105. Hana noqonina kuwa kala tegay oo kale ee iskhilaafay intay u yimaadeen Xujooyin ka dib kuwaasina waa kuwa Cadaab weyn u Sugnaaday.

وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِينَ تَفَرَّقُوا وَاخْتَلَفُوا مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَهُمُ الْبَيِّنَاتُ وَأُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٠٥﴾

106. Maalintay Caddaan (Nuuri) Wajiyaal oyna Madoobaan (Doorsoomi) Wajiyaal, kuway Madoobaato Wajiyadoodu (Waxaa lagu dhihi) miyaad Gaaloowdeen Rumeysiini ka dib, Dhadhamiya Cadaabka Gaalnimadiinii darteed.

يَوْمَ تَبْيَضُّ وُجُوهٌ وَتَسْوَدُّ وُجُوهٌ فَأَمَّا الَّذِينَ أُسَوِّدَتْ وُجُوهُهُمْ أَكْفَرْتُمْ بَعْدَ بَيِّنَاتِكُمْ فَذُوقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنْتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿١٠٦﴾

107. Kuwuu Caddaado (Nuuro) Wajigoodu Naxariista Eebe Dhaxdeeday ku waarayaan.

وَأَمَّا الَّذِينَ أَبْيَضَتْ وُجُوهُهُمْ فَمِنْ رَحْمَةِ اللَّهِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿١٠٧﴾

108. Taasi waa Aayaadkii Eebe oon ugu Akhriyeynaa korkaaga si Xaq ah, Eebana ma aha mid la doona Dulmi Caalamka.

كَذَلِكَ آيَاتُ اللَّهِ تَنْزَلُهَا عَلَيْكَ بِالْحَقِّ وَمَا اللَّهُ يُرِيدُ ظُلْمًا لِّلْعَالَمِينَ ﴿١٠٨﴾

109. Eebe waxaa u sugnaaday waxa Samaawaadka iyo Dhulka ku Sugaan, Xaggiisaana loo Celiyaa Umuuraha.

وَلِلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَلِلَّهِ يُرْجَعُ الْأُمُورُ ﴿١٠٩﴾

Ummadan Muslimka ah wuxuu Eebe faray Inay Khayrka u yeedhaan, Wanaaggana Faraan Xumaanta reebaana, si ay u Liibaanaan, oyna ka figaadaan kala tag iyo iskhilaaf, iyagoo Xaq u yimid, si ayna ula mid noqonin Gaalada Cadaab daran Mutay Maalinta Qiyaamana Wajiyada Mu'miniintuna way Dhalaali'kuwa Gaaladuna way Doorsoomi oo Madoobaan, Mu'miniintuna Janay ku waari, Gaaladuna Naarbay Dhadhamin, Aayaadka Eebana waa Xaq sugan, isagaana iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, Umuuraha oo dhanna Xaggiisaa loo Celin, Fadli badan yaana ku soo arooray Khayrkoo lays fero iyo Xumaanta oo layska reebo, waana Tiirka Diinta Islaamka'laguna Sharifay Ummadan Muxamdiyada ah.

Rasuulkuna wuxuu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Ruuxii arkaa Xumaan ha ku dooriyo Gacanta, hadduusan karin Carrabka, hadduusan karin Qalbiga, waana Iimaanka u tabar yar (Muslim) mar kale wuxuu yidhi: Eebaana ku dhaartee Wanaagaad faraysaan oo Xumantaanad reebaysaan ama wuxuu Eebe u dhawyahay inuu idinku diro Ciqaab agtiisa ah, ood Baridaan oosan idin Ajiibin. (Axmed iyo Kuwa kale). Taasina waxay ku tusin Ahmiyadda umuurtaas iyo in Ummadii ka tagtaa ay mudan Ciqaab Halaag. Aali-Cimraan (104-109).

110. Waxaad tihiin Ummadda u Khay-roon ee loo soo bixiyey Dadka, waxaad fartaan Wanaagga waxaadna ka reeb-taan Xumaanta waxaadna rumeysaan Eebe, hadday rumeeyaan Ehelu Kitaab-ku (Xaq) Saasaa u khayrroonaanla-hayd, waxaa ka mid ah Mu'miniin, badankoodna waa Faasiqiin.

كُنْتُمْ خَيْرَ أُمَّةٍ أُخْرِجَتْ لِلنَّاسِ تَأْمُرُونَ
بِالْمَعْرُوفِ وَتَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَتُؤْمِنُونَ
بِاللَّهِ وَلَوْ أَنَّمَنْ أَهْلَ الْكِتَابِ لَكَانَ خَيْرًا
لَّهُمْ مِنْهُمْ الْمُؤْمِنُونَ وَأَكْثَرُهُمُ الْفَاسِقُونَ ﴿١١٠﴾

111. Idin wax yeellayn mahayaan wax dhibah mooyee, hadday idin la dagaal-lamaana waxay idiin jeedin Dabada (way carari) loona Gargaari Maayo.

لَنْ يَضُرَّكُمْ إِلَّا أَذَىٌّ وَإِنْ يَقْتُلُكُمْ يَوْلَاكُمْ
إِنَّ أَوْلَىٰ آبَائِكُمْ بِالضَّرِّ وَالضَّرُّ وَالضَّرُّ
الَّذِينَ لَا يُضُرُّونَ ﴿١١١﴾

112. Waxaana lagu qadaray Korkooda Dulli meel kastooy joogaanba, Xadhig Eebe iyo Xadhig Dad mooyee, waxayna la noqdaan Cadho Eebe, waxaana lagu qadaray Miskiinimo, waxaana ugu wacan inay ka gaaloobaan Aayaadka Eebe Dilayaanna Nabiyada Xaq daro, wa-xaana ugu wacan Caasinimadooda iyo Xadgudubkooda.

ضُرِبَتْ عَلَيْهِمُ الذَّلِيلَةُ أَنْتُمْ مَا تُخَفُّونَ إِلَّا يَحْتَبِلُونَ
اللَّهُ وَحِبْلٍ مِنَ النَّاسِ وَبِأَنَّهُمْ يُغْضِبُونَ
وَضُرِبَتْ عَلَيْهِمُ الْمَسْكَنَةُ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَانُوا
يَكْفُرُونَ بِقَادِتِ اللَّهِ وَيَقْتُلُونَ الْأَنْبِيَاءَ بِغَيْرِ
حَقِّ ذَلِكَ بِمَا عَصَوْا وَكَانُوا يَعْتَدُونَ ﴿١١٢﴾

Eebe wuxuu sheegay in Ummadda Muxamadiyada ah u Khayrbadan tahay Umadaha, maxaa yeelay Wanaagga Faraan Xumaantana way reebaana, Eebana way rumeeyaan. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Anagaa ugu dambeyna Dadka uguna horayn Qiyaamada, uguna hor gali Jannada, in kastooy horteen la siiyey Kitaab inagana ka dib layna siiyey,

waxaana Eebe nagu hanuuniyey waxay isku Khilaafeen oo Xaq ah, Maantana way isku Khilaafeen, Dadkuna innagay ina raacaan, Barri Yuhuudbaa leh, Bari dambana Nasaara. (waxaa wariyey Abuu Yaqlaa).

Xumaanta Yuhuud iyo sida loo duleeyeyna wax badan yuu Quraanku ka waramay, hadday Muslimiinn dhab ah la dagaalamaana way Jabi ooy Carari, Dullibaana lagu Qadaray iyo Cadho Eebe, Illeen Aayaadka Eebe yey beeniyeene oo Ambiyaday Xaq darro ku Dili jireen oo waxay la imaanayeen Xumaan iyo Xad gudub. Haddaanse aragno inay Gaaladu Ayaamahaan isugu tageen Muslimiinta Dhulkii Islaamkana qabsadeen Dadkiina laayeen taas waxaa sababay Muslimiinta oon Jahaad dhab ah Jahaadin, si xaq ahna u raacin Amarka Eebe, markayse si dhab ah Eebe u Adeecaan Xadhigga Eebana wada qabsadaan shaki ma laha inay Adkaan'Xaqoodana soo Ceshan'Caalamkana Khayr ku hogaamin sida Eebe Ballan qaaday. Aali-Cimraan (110-112).

113. Isku mid ma aha, Ehelu Kitaabka waxaa ka mid ah Ummad u Taagan (Xaqa) oo Akhrida Aayaadka Eebe Saacadaha Habeenka iyagoo Sujuudsan, (waa Cabdullaahi Binu Salaam iyo Saaxiibadiis).

﴿لَيْسُوا سَوَاءً مِّنْ أَهْلِ الْكِتَابِ أُمَّةٌ قَائِمَةٌ يَتَّبِعُونَ آيَاتِ اللَّهِ فَإِذَا سَأَلْتُمُوهُمَ لِمَ لَا يَنصُرُونَ مَعَكُمْ إِذَا جَاءتْكُمُ الْفِتْنَةُ سَأَلْتُمُوهُمَ لِمَ لَا تُجَاهِدُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَقَدْ جَاءَكُمْ بِالْبَيِّنَاتِ ۗ قُلْ إِن كُنتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ ۗ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ﴾

114. Rumeyna Eebe iyo Maalinta Dambe farana Wanaagga kana reeba waxa la naco (Xun) una dag dagi Wanaagga, kuwaasi waxay ka mid yihiin kuwa suuban.

﴿يَوْمَ تَبْيَضُّ وُجُوهٌ وَتَسْوَدُّ وُجُوهٌ فَأَلْفُوفٌ يَّرْتَبِقُونَ ۗ أُولَئِكَ الَّذِينَ كَفَرُوا وَعَصَوُوا أُمُورًا كَثِيرًا سَاءَلَتْهُمْ أَقْبَابُ رَبِّهِمْ لِوَفَاءِهِمْ وَإِنَّ اللَّهَ لَشَدِيدُ الْعِقَابِ ۗ﴾

115. Waxay Falaan oo Khayr ah laga-ma qariyo (Dayaco), Eebana waa ogyahay kuwa dhawrsada.

﴿وَمَا يَتَّبِعُونَ إِلَّا مَثَلَهُمْ ۗ وَاللَّهُ عَالِمُ الْمُخْتَفِينَ ۗ﴾

116. Kuwa Gaaloobay kama kaafido Xoolahoodu iyo Caruurtoodu Eebe Xaggiisa waxba, kuwaasuna waa Ehelka Naarta wayna ku Dhex waari.

﴿إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا أَعْتَبُوا عَثَرَهُمْ وَعِشْرَانًا وَأَلْفًا وَسِتًّا مِّنْ أَوْلِيَائِهِمْ وَأَلْفًا وَسِتًّا مِّنْ أَوْلِيَائِهِمْ وَأَلْفًا وَسِتًّا مِّنْ أَوْلِيَائِهِمْ ۗ وَاللَّهُ عَالِمُ الْمُخْتَفِينَ ۗ﴾

117. Waxay Bixiyaan Noloshan Adduunna waxay la mid tahay Dabayl Qabow (daran) oo ku dhacday Beer Qoom dulmiyey Naftooda ooy Halaagtay, ma dulmiyey Eebe iyagaase Naftooda Dulmiyey.

﴿مَثَلُ مَا يُنْفِقُونَ فِي هَذِهِ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا كَمَثَلِ رِيحٍ فِيهَا صِرٌّ أَصَابَتْ حَرْثَ قَوْمٍ ظَلَمُوا أَنفُسَهُمْ فَأَهْلَكَتْهُ ۗ وَمَا ظَلَمَهُمُ اللَّهُ وَلَكِنْ أَنفُسُهُمْ يَظْلِمُونَ﴾

Marka Quraanku Ehelu Kitaabka wax kasheegi wuxuu u jeedaa kuwa Xaqa ka leexday, hase yeeshee kuwa rumeyey Xaqa sida Asaxaabigii Cabdullaahi Binu Salaam iyo Saaxiibadiisii kale, kuwaasoo Eebe ku tilmaamay Aayadahan Camalkoodii iyo waxa Eebe ku abaal marin oo Wanaag ah, kuwa Xaqa ka Gaaloobayse waxba uma taraan Xoolo iyo Caruuru, waxayna mudan Naar, Waxay Adduunka ku bixiyenna waxuu la mid yahay Beer Dabayl darani Halaagtay, Eebana Cidna ma Dulmiyo ee Dadku iyagaa Naftooda Dulmiya, Camalka Fiican ee layska abaal marin waxaa u shardi ah Eebe rumeyn iyo Xaq raacid, iyo Toosnaan, hadii kale waxay noqon wax kama jiraan iyo Lugooyo. Aali-Cimraan (113-117).

118. Kuwa (Xaqa) rumeeyow ha ka yeelanina Saaxiib (Hoose) wax idinka soo hadhay, kuma gabood falaan Fasaadintiinna waxayna Jecelyihiin dhibkiinna, waxay ka muuqataa Cadhadu Afkooda, waxay qarsan Laabahoodu yaa ka weyn, waan idiin Caddaynay Aayaadka haddaad wax kasaysaan.

يٰۤاَيُّهَا الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا لَا تَتَّخِذُوْا يٰۤاٰنٰهٖ مِّنْ دُوْنِكُمْ
لَا يٰۤاَلُوْنَكُمْ حَسَبًا وَّوَدُوْا مَا عَيَّرْتُمُوْا قَدْ بَدَتِ
الْبَغْضَآءُ مِنْ اَفْوَاهِهِمْ وَمَا تُخْفِيْ صُدُوْرُهُمْ
اَكْتَبَتْۙ قَدْ بَيَّنَّا لَكُمُ الْاٰيٰتِۙ اِنْ كُنْتُمْ تَعْقِلُوْنَ ﴿١١٨﴾

119. Idinkani waad Jeceshihiin Iyaguna idinma jecla, waxaadna rumeysaan Kitaabka dhammaantiis, hadday idin la kulmaanna waxay dhahaan waannu rumeynay Hadday kaliyoobaanna waxay idiin Qaniinaan Xubnaha (Faraha) Cadho darteed, waxaad dhahdaa ku dhinta Cadhadiinna, Eebana waa ogyahay waxa Laabta ku sugan.

هٰۤانۡتُمْ اَوْلَآءُ تُحِبُّوْنَهُمْ وَلَا يُحِبُّوْنَكُمْ وَتُوْمِنُوْنَ
بِالْكِتٰبِ كُلِّهٖ وَاِذَا الْقَوْمُ قَالُوْٓا اٰمَنَّا وَاِذَا حٰلَوْا
عَضُوْا عَلَيْنَا مِمَّنۡ الْاِنۡتٰمِلُ مِنَ الْعٰقِطِۙ قُلْ
مُوْمِنُوْا بِعَيْظِكُمْۙ اِنَّ اللّٰهَ عَلِيْمٌۢ بِذٰتِ الصُّدُوْرِ ﴿١١٩﴾

120. hadday idin taabato Wanaag way Xumeysaa hadday idinku dhacdo Xumaanna way ku Farxaan, haddaad Samirtaan ood Dhawrsataan idinkama dhibayso Dhagartoodu waxba, Eebana waxay Camal fali wuu Koobay.

اِنْ تَمَسَّسْتُمْ حَسَنَةً تَّسُوْٓا۟هُمْ وَاِنْ تُصِبْكُمُ سَيِّئَةٌ
يَفْرَحُوْٓا بِهَا وَاِنْ تُضَيِّرُوْا وَتَنْتَقُوْا لَا يَضُرُّكُمْ كَيْدُهُمْ
شَيْۤئًا اِنَّ اللّٰهَ بِمَا يَعْمَلُوْنَ مُجِيْبٌ ﴿١٢٠﴾

Eebe Sareeye wuxuu uga digi Mu'miniinta inay Gaalada ka yeeshaan Saaxiib gaar ahaaneed ooy Sirtooda ku Qarsadaan, taasi ma haboona oo Gaalo layskuma halleeyo, illeen waa Col Xumaan kula jecel, mararna ka sheega Afkooda, inkastoo waxa Laabta kaga jiraa ka weynyahay, Arrintaasna waa Xaal Eebe ogaysiiyey Mu'miniinta hadday wax fahmi ooy waana Qaadani.

Ma aha inaan jeclaanno iyagoo ina Neceb, oon rumeynay Xaqa dhammaan iyaguna ka Gaaloobeen, oyna Khayaani Mu'miniinta ooy Wanaag u muujin markay isla joogaan, markay kali noqdaanna Cadho Faraha inoola Qaniini, ha ku Dhinteen Cadho, Wanaageenay ka nixi oo Xumaanteenay ku Farxi, Haddaanse adkeysanno oon Toosnaanno Dhagartoodu waxba inama yeesho, illeen Eebaa koobay waxay Qarsan ama Camalfali oo Xumaan ah. Waxaa la sheegay in Cumar Binu Khadhaab lagu yidhi: Waxaa jooga Wiil Gaal ah oo wax Qora ee maad Qoraa ka dhigatid markaasuu yidhi: ma waxaan ka dhigan Saaxiib Hoose (Bidhaano) waxaa ku dhacay Muslimiinta oo Dulli iyo kala tag ah waa markay Gaalo Saaxiib moodeen, iyaguna Colloobeen oy Qaybsameen, waase in laga baxo arrintaas. Aali-Cimraan (118-120).

121. (Xusuuso) markaad ka Kallahday (tagtay) Ehelkaaga adoo u yeeli Mu'miniinta Goob Dagaal Eebana waa Maqle og.

وَاِذۡ عَدُوَّتَۙ مِّنۡ اٰهْلِکَ تَبَوَّءُ الْمُؤْمِنِيْنَ مَقْعِدًا لِلْقِتَالِ
وَاللّٰهُ سَمِيْعٌ عَلِيْمٌ ﴿١٢١﴾

122. Markay Hamiday "Doontay" Labo Kooxood oo idinka mid ah inay

اِذۡ هَمَّتۙ طٰٓئِفَتَانِ مِّنْکُمْ اَنْ تَفْسَلَا وَاللّٰهُ وَلِيُّهُمَا

Fashilaan (Cabsadaan) Eebana Wali-gooda (Gargaarahooda) ahaa ee Eebe uun ha tala saarteen Mu'miniintu.

وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴿١٢٢﴾

123. Dhab ahaan buu idiin ku Gargaaray Eebe (Maalintii) Badar idinkoo dulaysan "Tabar yar", ee ka Dhawrsada Eebe waxaadna mudantihii inaad ku mahdisaan.

وَلَقَدْ نَصَرَكُمُ اللَّهُ بِبَدْرٍ وَأَنْتُمْ أَذِلَّةٌ فَاتَّقُوا اللَّهَ
لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٢٣﴾

124. Markaad ku lahayd Mu'miniinta Miyuusan idiinku Fillayn inuu idinku Xoojiyo Eebihii Saddex Kun oo Malaa'ig ah oo soo Degi.

إِذْ تَقُولُ لِلْمُؤْمِنِينَ أَلَنْ يَكْفِيَكُمْ أَنْ يُبَدِّلَ كُرْسِيَكُمْ
بِمَلَأْتِهِ الْعِلْمَ مِنَ الْمَلَكِ مُمْرِلِينَ ﴿١٢٤﴾

125. Waa na kaafiyaan ee haddaad Samirtaan (Adkeysataan) ood dhawrsataan 'oy gaaladu degdeggoodaan idinku yimaadaan, Alle waa idinku Xoojin Shan Kun oo Malaa'ig ah oo Calaa-maysan.

بَلَى إِنْ تَصْبِرُوا وَتَتَّقُوا وَيَأْتُوكُم مِّن فَوْرِهِمْ
هَذَا يُبَدِّلْ كُرْسِيَكُمْ بِخَمْسَةِ آلْفٍ مِنَ الْمَلَكِ
مُسَوِّمِينَ ﴿١٢٥﴾

126. Uma yeelin Eebe (Arrintaas) Bishaaradiinna mooyee iyo inay ku Xasiis-ho Quluubtiinnu isaga, Gargaar aan Eebe agtiisa ahayna ma jiro ee ah Adkaade Falsan.

وَمَا جَسَدُ اللَّهِ الْإِنْسَانِي لَكُمْ وَلِتَطْمَئِنَّ قُلُوبُكُمْ
بِهِ وَمَا النَّصْرُ إِلَّا مِنْ عِنْدِ اللَّهِ الْعَزِيزِ الْحَكِيمِ ﴿١٢٦﴾

127. Si uu u Gooyo (Halaago) qayb ka mid ah kuwa Gaaloobay ama Walba-haariyo oy Noqdaan iyagoo Khasaaray.

لِيَقْطَعَ طَرَفًا مِّنَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَوْ يَكْبِتُنَّهُمْ
فَيَنْقَبُوا خَتَايَهُمْ ﴿١٢٧﴾

Aayadahan wuxuu Eebe kaga warami Dagaalladii Uxud iyo Badar oo Tan hore ahayd Bishii Soonfur Sanadkii Saddexaad ee Hijrada Uxudna waa Buur weyn oo Magaalada Madiina Xagga Waqooyiga ka xigta, Muslimiintana dhibaa ku gaadhay markay Khilaafeen Amarkii Nabiga Qaarkood oo ka tageen halkay ilaalinayeen, markaas laga soo galay halkaa ilaa Nabiga laga dhaawacay Dad badan oo Asaxaabtii ahna ku Shihiideen, taasina waxay ku tusin Xumaanta is khilaafka iyo amarka Fiican Diidmadiisa waana waxay u Waajibtay in laga digtoonaado. Tan kale waa Dagaalkii Badar ee weynaa ee Eebe u gargaaray Muslimiinta Xoojiyeyna iyagoo Tabar iyo Tiraba yaraa, hase yeeshee Eebaa Nasrigiisa iyo Malaa'ig ugu gargaaray, Taasina waxay ku tusin in Eebe u gargaari Muslimiinta markay dhab ahaan Eebe u Adeecan Sharcigiisana ku dhaqmaan, Day sida loo jabiyey Gaaladii Quresheed ee Kibirka u soo duushay si ay Xaqa u baabi'yaan una waxyeecayaan Muslimiinta.

Badar waa magaalo u dhaw Madiina Dagaalkuna wuxuu ahaa Maalin Jamce ah Todobiyo Tobanka Bisha Soon, Sanadkii Labaad ee Hijrada, Muslimiintu waxay ahaayeen saddex boqol iyo dhawr iyo toban gaaladuna ilaa kun. Aali-Cimraan (121-127).

128. Waxba Amarka kuma lihid Nabitoy ama wuu ka Toobad aqbali Eebe ama wuu Cadaabi Gaalada, illeen waa Daalimiine.

لَيْسَ لَكَ مِنَ الْأَمْرِ شَيْءٌ أَوْ يَتُوبَ عَلَيْهِمْ أَوْ يُعَذِّبَهُمْ فَإِنَّهُمْ ظَالِمُونَ ﴿١٢٨﴾

129. Eebaa iska leh waxa Samooyinka ku sugan iyo waxa Dhulka ku sugan, wuxuu u dhaafaa (Dambiga) Ciduu doono, wuxuuna Cadaabaa Ciduu doono, Eebana waa Dambi dhaafe Naxariista.

وَلِلَّهِ مَا فِي السَّمٰوٰتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ يَغْفِرُ لِمَن يَشَاءُ وَيُعَذِّبُ مَن يَشَاءُ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢٩﴾

130. Kuwa (Xaqa) rumeeyow ha u Cunina Ribada Laablaab, kana Dhawrsada Eebe waxaad Mudantihii inaad Liibaantaane.

يٰۤاَيُّهَا الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا لَا تَأْكُلُوْا اَمْوَالَكُمُ الَّتِيْ رَزَقْتُمْ مِّنْهُ مَصْلَعَةً وَّاَتَقُوْا اللّٰهَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُوْنَ ﴿١٣٠﴾

131. Kana dhawrsada Naarta loo Darbay Gaalada.

وَاتَّقُوا النَّارَ الَّتِيْ أُعِدَّتْ لِلْكَٰفِرِيْنَ ﴿١٣١﴾

132. Adeecana Eebe iyo Rasuulka waxaad u dhawdihii in laydiin Naxariistee.

وَأَطِيعُوا اللّٰهَ وَالرَّسُوْلَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُوْنَ ﴿١٣٢﴾

133. Una deg daga Dambi dhaafka Eebihii iyo Janno Ballaadhkeedu yahay Samaawaadka iyo Dhulka oo loo darbay kuwa dhawrsada.

* وَسَارِعُوْا اِلَى مَغْفِرَةٍ مِّنْ رَبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا السَّمٰوٰتُ وَالْاَرْضُ أُعِدَّتْ لِلْمُتَّقِيْنَ ﴿١٣٣﴾

134. Ee ah kuwa wax bixiya Waqtiga Ladnaanta iyo Dhibkaba, ee Damiya Cadhada ee iska Cafiya Dadka, Eebana waa Jecelyahay Samafalayaasha.

الَّذِيْنَ يُنْفِقُوْنَ فِي السَّرَّاءِ وَالضَّرَّاءِ وَالْكُتٰمِ الْغَيْظِ وَالْعَافِيَةِ عَنِ النَّاسِ وَاللّٰهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِيْنَ ﴿١٣٤﴾

135. Kuwa markay falaan Xumaan ama Dulmiyaan Naftooda Xusa Eebe, Warsadana Dambi dhaafid dambigooda, wax dambi dhaafana ma jiro Eebe mooyee, oon daa'imin (Xumaantay) faleen iyagoona og.

وَالَّذِيْنَ إِذَا فَعَلُوا فَحِيْشَةً وَّظَلَمُوْا اَنْفُسَهُمْ دَكَرُوْا اللّٰهَ فَاسْتَغْفَرُوْا لِذُنُوْبِهِمْ وَمَن يَغْفِرِ الذُّنُوْبَ اِلَّا اللّٰهُ وَلَمْ يُبْصِرْ وَّاعْلَمَ مَا فَعَلُوْا وَهُمْ يَعْلَمُوْنَ ﴿١٣٥﴾

136. Kuwaas Abaalkoodu waa Dambi dhaafka Eebahood iyo Jannooyin ay Dureeri dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda, waxaa Wanaagsan Abaalka kuwa Camal Falay.

أُوْلٰٓئِكَ جَزَاءُ هُم مَّغْفِرَةٌ مِّنْ رَبِّهِمْ وَجَنَّتْ تَجْرِيْ مِّنْ تَحْتِهَا الْاَنْهٰرُ خٰلِدِيْنَ فِيْهَا وَبِعَمَلِهِمْ اٰجُرُ الْعٰمِلِيْنَ ﴿١٣٦﴾

Gaaladu waxay ka Jabiyeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee) Maalintii Uxud Dhoosha wayna Dakhreen markaasaa Dhiiggu Dareeray markaasuu yidhi say u Liibaani Qoom ku falay Nabigooda waxaas isagoo Xaqa u yeedhi, markaasay soo dagtay Waxba kuma lihid Amarka, Eebaa ku shaqa leh oo ama ka Toobad aqbali ama Cadaabi kolley waa daalimiine, illeen isagaa Xukunka Caalamka iska lehe, taasina waxay ku tusin in Jahaad iyo Camal Waajibtahay Arrinta dhabteedase Eebe ku shaqaleeyahay, wuxuu rabana fali Cidduu rabana u gargaari. Ribaduna waa xaaraan Reeban ama ha yaraato ama ha badnaatee, saan soo sheegnay, waana in Naar laga dhawrsadaa Eebe iyo Rasuulkiisana la Adeeco loona dagdago Dambi dhaaf iyo Janno wayn oo loo darbay kuwa dhawrsaday, ee wax bixiya had walba, ee Cadha Damiya, Cafiyana Dadka, Wanaagana Sameeya, Eebana Xusa markay Dambaabaan, Dambi dhaafna Eebe warsada, illeen waxaan Eebe ahayn Dambi ma dhaafee, oon Xumaanta Daa'imin, waxaana lagu abaal marin DambiDhaaf iyo Jannooyin ay ku Waari loona darbay kuwa Camalka Fiican. Saas darteed waa in wanaagga lagudadaalo Xumaantana laga fogaado. Aali-Cimraan (128-136).

137. Waxaa dhab ahaan u tagay hortiin Sunnooyin (Waddooyin) ee Socda Dhulka oo eega siday noqotay Cidhibtii Beeniyayaashii.

فَدَخَلَتْ مِنْ فَتِيحِكُمْ سِتْرٌ فَيَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ
فَأَنْظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الْمُكْذِبِينَ ﴿١٣٧﴾

138. Kaasi waa Caddayn Dadka waana Hanuun iyo Waanada kuwa dhawrsada.

هَذَا بَيَانٌ لِلنَّاسِ وَهُدًى وَمَوْعِظَةٌ
لِّلْمُتَّقِينَ ﴿١٣٨﴾

139. Ha tabar yaraanina hana Muru-
goonina idinkoo Sarreeya haddaad Ti-
hiin Mu'miniin.

وَلَا تَهِنُوا وَلَا تَحْزَنُوا وَأَنْتُمُ الْأَعْلَوْنَ إِنْ كُنْتُمْ
مُؤْمِنِينَ ﴿١٣٩﴾

140. Hadduu idin taabtay Dhib (Dhaa-
wac) Dhabahaan buu u taabtay Qoo-
makan Dhib la mid ah, waana Saas
Adduunyadu waxaanu ku kala wareeji-
naa Dadka Dhexdiisa iyo in Eebe
Muujiyo kuwa rumeeyey kana yeesho
Xaggiinna Shuhado, Eebana ma jecle
Daalimiinta.

إِنْ يَمْسَسْكُمْ قَرْحٌ فَقَدْ مَسَّ الْقَوْمَ قَرْحٌ مِّثْلَهُ
وَيَلِكُ الْآيَاتُ تَدُلُّ عَلَيْهَا بَيِّنَاتٌ لِّعَلَّمَنِ اللَّهُ
الذِّبِينَ ءَامِنُوا وَبِتَّخِذُوا مِنْكُمْ شُهَدَاءَ ۗ وَاللَّهُ
لَا يُحِبُّ الظَّالِمِينَ ﴿١٤٠﴾

141. Iyo inuu Imtixaamo kuwa ru-
meeyey Tirtirana Gaalada.

وَأَيُّمَحْصَ اللَّهُ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَيَمْحَقَ
الْكَافِرِينَ ﴿١٤١﴾

142. Ma waxaad u Maleyseen inaad
Galayssaan Jannada isagoon Muujinin
Eebe kuwa Jahaaday oo idinka mid ah
oosan Muujinin kuwa Samra.

أَمْرٌ حَسْبُكُمْ أَنْ تَدْخُلُوا الْجَنَّةَ وَلَمَّا يَعْلَمِ اللَّهُ الَّذِينَ
جَاهَدُوا مِنْكُمْ وَيَعْلَمِ الضَّالِّينَ ﴿١٤٢﴾

143. Dhab ahaan waxaad u ahaydeen
kuwa jecel Geerida ka hor la kulankeeda,
waadna aragteen Geeridii idinkoo
Fiirin.

وَلَقَدْ كُفِّرْتُمْ نَنْوَتِ الْمَوْتِ مِنْ قَبْلِ أَنْ تَلْقَوْهُ فَقَدْ
رَأَيْتُمُوهُ وَأَنْتُمْ تَنْظُرُونَ ﴿١٤٣﴾

Eebe wuxuu u sheegay Mu'miniinta Dagaalkii Uxud ka dib inuu Imtixaankan oo kale u horreeyey Umadihii hore, Quraankuna Hanuun iyo Waano yahay, in la Cabsado oo la tabaryaraado ama La walbahaarana ayna haboonayn, maxaayecelay waxaa Guusha ku dambeyn Mu'miniinta dhabta ah, hadduu Dil iyo dhaawac idin Taabtayna iyagaba wuu Taabtay waana sidaas Sunnada Eebe inay marba Ruux ka dhaaco Masiibadu, waana Imtixaan, mana suurood in Janno la gala Imtixaan la'aan, Mana aha in Jahaadka iyo ku Shihiidkiisa la Jeclaado marka Gaalada lala kulmana la Cabsado.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Ha jeclaanina la kulanka Colka, ee Warsada Eebe Caafimaad, markaad la kulantaanna Adkaysta oo Ogaada in Jannadu tahay Hooska Seefaha Hoostiisa (Saxiix). Aali-Cimraan (137-143).

144. "Nabi" Muxamadna ma aha waxaan Rasuul ahayn, waxaa Tagey hortiiis Rasuullo, ee hadduu Dhinto ama La dilo ma waxaad u gaddoomaysaan Cidhibtiinii (Dib), Ruuxii U gadooma Cidhibtiisii (Gaalooaba) kama Dhibo Eebe waxba, wuuna Abaal marin kuwa ku Shukriya.

وَمَا مُحَمَّدٌ إِلَّا رَسُولٌ قَدْ خَلَتْ مِنْ قَبْلِهِ الرُّسُلُ
أَفَإِنْ مَاتَ أَوْ قُتِلَ انْقَلَبْتُمْ عَلَى أَعْقَابِكُمْ وَمَنْ
يَنْقَلِبْ عَلَى عَقْبَيْهِ فَلَنْ يَصُرَ اللَّهُ شَيْئًا وَسَيَجْزِي
اللَّهُ الشَّاكِرِينَ ﴿١٤٤﴾

145. Nafna ma aha tii Dhimata Idanka Eebe la'aantiis waa Kitaab Muddeysan, Ruuxii Doona Abaalka Adduunyo waxbaan ka siineynaa, ruuxii doona Abaalka Aakhirana Waxbaan Ka Siinaa, Waxaana Abaal marin kuwa Shukriya.

وَمَا كُنْتُمْ أَنْ تَقُولُوا مَا كُنْتُمْ إِلَّا بِلَاذِنِ اللَّهِ
كُتِبَ عَلَيْكُمُ الْقِتَابُ وَالْحِسَابُ وَمَنْ يُؤَدِّ الْعَسْوَاقَ
وَمَنْ يُؤَدِّ الْعَسْوَاقَ وَالْآخِرَةَ تُوْفِيهِ مِنْهَا
وَمَنْ يُؤَدِّ الْعَسْوَاقَ وَالْآخِرَةَ تُوْفِيهِ مِنْهَا
وَمَنْ يُؤَدِّ الْعَسْوَاقَ وَالْآخِرَةَ تُوْفِيهِ مِنْهَا
اللَّهُ الشَّاكِرِينَ ﴿١٤٥﴾

146. Badanaa Nabi la Dilay* iyadoo ay la Jireen culimo Dagaallami oo Badan, oyna Cabsanin wax ku Dhacay Jidka Eebe Dartiis, Tabarna yareynin, Dulloobinna, Eebana waa Jecelyahay kuwa Samra.

وَكُلِّمْنَا مِنْ بَنِي إِسْرَائِيلَ قَوْلًا فَمَنْ
وَهْنُوا لِمَا أَصَابَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَمَا ضَعُفُوا
وَمَا أَسْتَكْبَرُوا وَاللَّهُ يُحِبُّ الضَّعِيفِينَ ﴿١٤٦﴾

147. Mana aha Hadalkoodu waxaan ahayn Eebow nooDhaaf Dambigannaga iyo Xadgudubkanaga Amarkanaga, Sugna Gomadahanaga noogana Garbaar Qoomka Gaalada ah.

وَمَا كَانَ قَوْلُهُمْ إِلَّا أَنْ قَالُوا رَبَّنَا اغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا وَإِسْرَافَنَا
فِي أَمْرِنَا وَثَبِّتْ أَقْدَامَنَا وَانصُرْنَا عَلَى الْقَوْمِ
الْكَافِرِينَ ﴿١٤٧﴾

148. Markaasuu Siiey Eebe Abaalka Adduunyo iyo Wanaagga Abaalka Aakhiro, Eebana wuxuu Jecelyahay Samafalayaasha.

فَقَاتِلْهُمْ اللَّهُ تُوْفِيهِمْ قَوْلًا لَدُنْهُمْ وَحَسَنَّ قَوْلًا
الْآخِرَةَ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ ﴿١٤٨﴾

Maalintii uxud markuu dhibgaadhay Muslimiinta yaa lagu Dhawaaqay in la Dilay Nabiggi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxaana jirtay in La dhaawacay, markaasay Naxeen oo Walbahaareen Muslimiintii markaasay soo Dagtay Aayaddu. Cidwalbana way Dhiman waxaase Hadhi

Eebe, Nabiyadii horana waa kuwii Dhintay, waxaase loo baahanyahay Adkaysi iyo Samir iyo doonid Abaalmarinta Eebe ee wanaagsan, ee ma banaana in la shakiyo ama la Walbahaaro oo la Tabaryareeyo. Aayaddana waxaa Akhriyey Abuubakar Maalintii Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Geeriyooday, markuu u yimid Cumaroo Dadka la Hadli, oo leh Car waa Ruuxii Sheega in Nabigii Dhintay, markaasuu Abuubakar Khudbad Akhriyey Isagoo leh Ruuxii "Nabi" Muxamed Caabudayayow Muxamed wuu dhintay, Ruuxii Eebe Caabudayeyna eebe waa Noolyahay mana Dhimanayo. Taasina waxay ku tusin Fadliga Abuubakar iyo Xaq ku Sugnaantiisa, Saasaana looga Baahanyahay Mu'minka inuu Xaqa ku Sugnaado Had iyo Jeer iyo Si Walba. Aali-Cimraan (144-148). * tarjumuhu, wuxuu fasiray qirada Abii camr oo ah (كُتِبَ).

149. Kuwa Xaqa Rumeeyow haddaad Addeecdaan (Maqashaan) Kuwa Gaalobay waxay idiin Celin cidhibtiina, markaasaad Noqonaysaan idinkoo khasaaray.

يٰۤاَيُّهَا الَّذِيْنَ اٰمَنُوْا اِنْ تَطِيْعُوْا الَّذِيْنَ
كَفَرُوْا يَدُوْكُمْ وَعَلٰى اَعْقَابِكُمْ
فَتَنْقَلِبُوْا خٰسِرِيْنَ ﴿١٤٩﴾

150. Eebaase Gargaarihiinna ah, isagaana ugu Khayrroon Gargaare.

بَلِ اللّٰهِ مَوْلٰىكُمْ وَهُوَ خَيْرُ الرَّٰثِرِيْنَ ﴿١٥٠﴾

151. Waxaan ku Tuuraynaa Quluubta kuwa Gaalobay Argagax la Wadaajintooda Eebe waxaan loo soo Dejinin Xujo Darteed, Hoygooduna waa Naar, Iyadaana U xun Xerada Daalimiinta.

سَنَلْقٰى فِيْ قُلُوْبِ الَّذِيْنَ كَفَرُوْا الرَّغْبَ بِمَا
اَشْرَكُوْا بِاللّٰهِ مَا لَمْ يُنَزَّلْ بِهِ سُلْطٰنًا
وَمَا وَهَمُوْا بِالنَّارِ وَبِئْسَ مَثْوٰى
الظّٰلِمِيْنَ ﴿١٥١﴾

152. Dhab ahaan yuu idiinku Rumeeyey Eebe Yaboohiisii markaad ku Dhamayneeseen (Ku dilayseen) Idamkiisa, intaad ka Cabsataan ood ku Murantaan Amarka ood Caasidaan intuu idin Tusiyeey waxaad Jeceshihiin ka Dib, waxaa idinka Mid ah Ruux Dooni Adduunyo, waxaana idinka mid ah Ruux dooni Aakhiro, markaas idinka Lilay Xagooda si uu idiin Imtiixaano, dhab ahaanna wuu idiin Cafiyey, Eebena wuu ku Fadli leeyahay Mu'miniinta.

وَلَقَدْ صَدَقَكُمُ اللّٰهُ وَعَدَهُ اِذْ
تَحْسَبُوْنَهُمُ يَدُوْٓا۟ حَتّٰٓى اِذَا فُجِئَتْهُمُ
وَتَنَزَعْتُمْ فِيْ الْاَمْرِ وَعَصَيْتُمْ مِّنْۢ بَعْدِ مَا
اُرْسِلْتُمْ مَا تُحِبُّوْنَ مِنْكُمْ مَّنْ يُرِيْدُ الدُّنْيَا
وَمِنْكُمْ مَّنْ يُرِيْدُ الْاٰخِرَةَ ثُمَّ صَرَفَكُمْ
عَنْهُمُ لِيَتَّبِعَكُمْ وَلَقَدْ عَفَا عَنْكُمْ
وَاللّٰهُ ذُوْ فَضْلٍ عَلٰى الْمُؤْمِنِيْنَ ﴿١٥٢﴾

153. Markaad koreyseen aydaan Milicsanayn Cidna, Rasuulkuna idiinka Yeedhi Gadaashiina oo idinku dhacay Murug la jirto Murug (kale) si aydaan ugu Walbahaarin wixii idin ka tagay iyo wixii idinku Dhacay, Eebana waa ogyahay waxaad Falaysaan.

* اِذْ تَصُوْرُوْنَ وَلَا تَلُوْرُوْنَ عَلٰٓى
اَحَدٍ وَالرَّسُوْلُ يَدْعُوْكُمْ فَاٰخِرَتَكُمْ
فَاٰتَبَكُمْ غَمًا يَّعْبُرُ لَكُمْ يَلًا تَحْتَرُوْنَ اَعْلٰى
مَا فَاٰتَكُمْ وَلَا مَا اَصَابَكُمْ وَاللّٰهُ
خَبِيْرٌۢ بِمَا تَعْمَلُوْنَ ﴿١٥٣﴾

Qisada Dagaalkii Uxud aadbay Aayaduhu uga Warameen, waxayna si Fiican u Tilmaameen Xaalkii Muslimiinta iyo say u Xanuunsadeen markay Koox ka mid ah oo Ilaalinsay Colka Khilaaftay Amarkii Rasuulka, lagana Cararay Rasuulkii isagoo ugu Yeedhi inay soo Joogsadaan. Tan kale War Gaal waa inaan la maqlin oon la Adeecin illeen waa Khasaare. Waxaa Sugnaatay in Rasuulku (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku yidhi: Cabdullahi Binu Jubayr iyo Kooxdiiisii: Halkan haka tagina, xataa haddaad Aragtaan Anagoo nala Jabiyey ha noo kaalmeynina, Markey Muslimiintu Reeyeen yaa Kooxdii ka tagtay Halkeedii Ninkii Madaxda u ahaa iyo wax yar mooyee, markaasay Gaaladii Soo hareereeyeen Muslimiintii. Taasina waxay ku tusin Wanaagga isku Duubnida Muslimiinta iyo Xumaanta iskhilaafka. Ruuxii doona inuu si Fiican u siyaad sado Arrintan ha Akhriyo Kutubta Siirada iyo Tafsiirada wax badan buu ka helaye. Aali-Cimraan (149-153).

154. Markaas uu ku soo Dejiyey Korkiinna Murug ka dib Aaminimo Dar-teed Lulmo daboolaysa Koox idinka mid ah, Kooxna waxaa Walaacisay Naftooda waxayna u Malayn Eebe Male Jaahiliyeed waxayna Dhihi ma waxbaan ku leenahay Amarka, waxaad dhahdaa Amarka Dhamantiis Eebaa iska leh, waxayna ku Qarin Naftooda waxayna kuu muujinayn iyagoo dhihi haddaan Amarka wax ku leenahay Nalaguma Dileen Halkan, waxaad Dhahdaa haddaad tihiin Guryihiinna way u soo bixilahaayeen kuwa loo Qoray Geerida halkay Seexan (Lagu Dili), (saasna wuxuu u Falay Eebe) inuu Imtixaano Eebe waxa Laabtiinna ku Sugan iyo inuu kala Shaandheeyo waxa Quluubtiinna ku Sugan, Eebana waa Ogyahay waxa Laabta Ku Sugan.

155. Kuwii Jeedsaday oo idinka mid ah Maalintay Kulmeen Labadii Col waxaa uun Simbiriirixiyey Shaydaan waxay kasbadeen Sababtiisa Qaarkood wuuna iska Cafiyey Eebe Xagooda Eebena waa Dambi Dhaafe dulbadan.

ثُمَّ أَنْزَلَ عَلَيْكُمْ مِنْ بَعْدِ الْغَمِّ أَمْنَةً نَاعَسًا يَغْشَى
طَائِفَةً مِنْكُمْ وَطَائِفَةٌ قَدْ أَهَمَّتْهُمْ أَنْفُسُهُمْ
يَظُنُّونَ بِاللَّهِ غَيْرَ الْحَقِّ ظَنَّ الْجَاهِلِيَّةِ يَقُولُونَ
هَلْ لَنَا مِنَ الْأَمْرِ مِنْ شَيْءٍ قُلْ إِنَّ الْأَمْرَ كُلَّهُ لِلَّهِ
يُخْفُونَ فِي أَنْفُسِهِمْ مَا لَا يُبْدُونَ لَكَ يَقُولُونَ لَوْلَا
رَأَيْنَا مِنَ الْأَمْرِ شَيْئًا مَا فُتِنَّا لَهُمْ نَاقِلٌ لَوْ كُنْتُمْ فِي
بُيُوتِكُمْ لَبَرَزَ الَّذِينَ كُتِبَ عَلَيْهِمُ الْقَتْلُ إِلَى
مَضَاجِعِهِمْ وَلِيَبْتَلِيَ اللَّهُ مَا فِي صُدُورِكُمْ
وَلِيَمْحِصَ مَا فِي قُلُوبِكُمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ
الصُّدُورِ ﴿١٥٤﴾

إِنَّ الَّذِينَ قَوْلُوا مِنْكُمْ يَوْمَ الْاْتَمَعَانِ
إِنَّمَا اسْتَكْرَمُوكُمُ الشَّيْطَانُ بِبَعْضِ مَا كَسَبُوا وَلَقَدْ
عَفَا اللَّهُ عَنْهُمْ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿١٥٥﴾

Eebe wuu ku manaysan Addoomadiisa wuxuu ku soo dajiyey Mu'miniinta Uxud oo Lulmo ah Murug ka Dib, sidoo kale Xasilooni Taasina waxay ku tusin Sugnaan iyo Ku kalsoonida Eebe, Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey: Lulmadu Dagaalka waxay ka timid Eebe, Salaaddana Shaydaan. (Waxaa Sheegay Ibnu Abii Xaatim).

Munafiqintuse waxay la Joogen Qas iyo Calaacal iyo ma Amaraa Gacanta noogu Jira, Xaalka Eebaa iska leh Dhammaantiis. Cidii Dagaalka ku Dhimatana Kolley way u soo bixilahaayeen Halkay ku Dhinteen, Hase yeeshe wuxuu Eebe saas u falay Imtixaan Dartiis, iyo inay caddaadaan kuwa Simbiriirixday oo Shaydaan Waswaasiyey. Saas darteed waa Eebe in lagu kalsoonaado, wax fiicana

laga malaysto, Walaacin iyo Murugeyn Mu'miniintana layska jiraa illeen isagaa wax walba awoodee. Muslimiintii Hore Qaarkood waxay Dhihi jireen; Wanaagga Abaalkiisu waa in Wanaag lagu wafajiyi, Xumaanta Abaalkeeduna waa in Xumaan kale lagu Dhoco. Runtii Qisada Uxud waa Imtixaan Cad. Aali-Cimraan (154-155).

156. Kuwa (Xaqa) rumeeyow ha Noqonina sida kuwa Gaaloobay oo ku yidhi Walaalahood markay ku Safraan Dhulka ama Duulaan hadday Agtanaada Joogaan ma Dhinteen Lamana Dileen si uu uga yeelo Arrintaas Qoomamo Quluubtooda, Eebana waa Nooleeye iyo Dile, Eebana waxaad Camal Falaysaan wuu arkaa.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَكُونُوا كَالَّذِينَ كَفَرُوا وَقَالُوا
لَاخِرَ لَنَا فِي الْأَرْضِ وَكُلُّوا عُرَى
لَوْ كُنَّا نَعْنَدُ مَا مَأْتُوا وَمَا قَلُوا لِيَجْعَلَ اللَّهُ
ذَلِكَ حَسْرَةً فِي قُلُوبِهِمْ وَاللَّهُ يُخَيِّئُ وَيُمِيتُ وَاللَّهُ
بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١٥٦﴾

157. Haddii laydinku Dilo Jidka Eebe amaad Dhimataan Dambi Dhaaf Eebe iyo Naxariistiisa yaa idiinka Khayrbadan waxay Kulmin.

وَلَيْنَ فُتِنْتُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَوْ مُتْتَمِعْتُمْ مِنْ اللَّهِ
وَرَحْمَةً خَيْرٌ مِمَّا يَجْمَعُونَ ﴿١٥٧﴾

158. Haddaad Dhimataan ama laydin Dilo Xagga Eebe umbaa laydiin Celin.

وَلَيْنَ مُتْتَمِعْتُمْ أَوْ قُتِلْتُمْ لِيَلِيَ اللَّهُ تَحْتَمِرُونَ ﴿١٥٨﴾

159. Naxariista Eebe Darteed yaad ugu Jilicday haddaadse tahay Mid Ingagan oo Qalbi Adag way kaakala tagi lahaayeen Gaararkaada, ee iska Cafi una Dambi Dhaaf warso kalana Tasho Amarka, markaas haddaad wax goosataana talo saaro Eebe (Ku Dhaqaaq), Eebe wuxuu Jecelyahay kuwa Tala Saartee.

فِيمَا رَحِمَهُ مِنَ اللَّهِ لَنْتَ لَهُمْ وَلَوْ كُنْتَ فَظًّا غَلِيظًا
الْقَلْبِ لَأَنْفَضُوهُ مِنْ حَوْلِكَ فَاعْفُ عَنْهُمْ
وَاصْفَحْ لَقَدْ أَخَذَ اللَّهُ مِيثَاقَ بَنِي إِسْرَائِيلَ
قَالُوا لَنْ نَبْرُكُكَ مِنْ بَعْدِ هَذِهِ الْأَيَّامِ فَذَكَرْنَا
عَلَى اللَّهِ أَنْ يَكُونَ اللَّهُ يَخُفُّ الْمُتَوَكِّلِينَ ﴿١٥٩﴾

160. Hadduu idin Gargaaro Eebe wax idinka Adkaan ma jiro Hadduu idin Hoojiyana waa Kuma kan idiin Gargaari Gadaashiis, Eebe uun ha Tala Saarteen Mu'miniintu.

إِنْ يَنْصُرْكُمُ اللَّهُ فَلَا غَالِبَ لَكُمْ وَإِنْ يَخْذَلْكُمْ
فَمَنْ ذَا الَّذِي يَنْصُرُكُمْ مِنْ بَعْدِهِ وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ
الْمُؤْمِنُونَ ﴿١٦٠﴾

Rasuulka Muxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Eebe ugu Deeqay Dabeeco Fiican Saas darteed yey Mu'miniintu ugu soo kulmeen, Hadduuse Kakanyahay way ka Agcarari lahaayeen, saasuuna Eebe u faray inuu iska Cafiya wixii Dhib ah ee kaga yimaada Mu'miniinta, Una Dambi dhaaf Warsado, Lana Tashado, Marka arrin la goostana lagu Talaabsado isagoo la talo Saaran Eebe, Gargaarna Eebaa iska leh, hadduu Muslimiinta u gargaaro wax ka adkaan ma jiro, haddii kalena yaa Eebe ka soo hadhay oo Gargaara ah. Mu'miniintuna waa inayna noqonin sida Gaalada oo Ciddii meel ku soo Dhimata ama Jahaad ku Shahiidda ku dhihin hadday nala joogi lahaayeen mayna Dhinteen, Taasina waa Qoomamo la yeelay Quluubtooda, Eebaase waxna Nooleeya waxna Dila, Si

kastodo u dhimatana Eebaa lagu Hor keni, waxaase ka Khayroon waxa la kulmin oo Aduunya ah in lagu Shahiido Jidka Eebe si Dambi Dhaaf iyo Naxariis Eebe loo helo, Aali-Cimraan (156-160).

161. Kama suurowdo Nabi inuu Ganii-mo wax ka Khayaamo, Ruuxii Ganii-mo wax ka Khayaama wuu la Imaan wuxuu Khayaamay Maalinta Qiyaame, markaas waxaa loo Oofin (Dhamayn) Nafkasta waxay Kasbatay Lagamana dulmiyo.

وَمَا كَانَ لِنَبِيٍّ أَنْ يَغُلَّ وَمَنْ يَغُلَّ يَأْتِ بِمَا غَلَّ يَوْمَ
الْقِيَامَةِ ثُمَّ تُوَفَّى كُلُّ نَفْسٍ مَا كَسَبَتْ وَهُمْ
لَا يُظْلَمُونَ ﴿١٦١﴾

162. Ruux Raacay Raalli ahaanshaha Eebe ma la mid Baa Ruux la noqday Cadho Eebe Hoygiisuna yahay Jahan-namo iyadaana U xun meel loo Noqdo.

أَفَمَنْ أَسَّعَ رِضْوَانُ اللَّهِ كَمَنْ بَاءَ بِسَخَطٍ مِنَ اللَّهِ
وَمَا أَوْلَاهُ جَهَنَّمَ وَيَسَّ الْمَصِيرُ ﴿١٦٢﴾

163. Iyagu waa Darajaad Eebe agtiisa, Eebana waa Arkaa waxay Fali.

هُمْ دَرَجَاتٌ عِنْدَ اللَّهِ وَاللَّهُ بِمَا يَعْمَلُونَ
خَبِيرٌ ﴿١٦٣﴾

164. Dhab ahaanbuu ugu Manaystay Eebe Mu'miniinta markuu ka Bixiyey Dhexdooda Rasuul Naftooda ka mid ah kuna Akhriyi Korkooda Aayaadkiisa Daahirinna Barina Kitaabka (Quraanka) iyo Xigmada (Sunada Nabiga) waxayna ahaayeen Horay Baadi Cad.

لَقَدْ مَنَّ اللَّهُ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ إِذْ بَعَثَ فِيهِمْ رَسُولًا مِنْ
أَنْفُسِهِمْ يَتْلُوا عَلَيْهِمْ آيَاتِهِ وَرَضِيَ عَنْهُمْ
وَيُعَلِّمُهُمُ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَإِنْ كَانُوا مِنْ
قَبْلَ لَفِي ضَلَالٍ مُبِينٍ ﴿١٦٤﴾

Khayaamada iyo Dhagartu waa ka Reebantahay Ruuxa Muslimka ah ama haato waxa Gaalada Laga helo ama waxa kale, Khayaamadana wuu keeni Qiyaamada Saaxiibkeed isagoo Xambaarsan, Cidwalbana waxay la kulmi Qiyaamada waxay kasbatay Dulmina ma jiro. Ruux raacay Xaqa Eebe la mid ma aha mid Cadho Alle ku dhacday oo Gali Naar, Dadkuna waa Darajaad oo iskuma Qasna Eebana waa Arkaa, Mu'miniintuna wuxuu Eebe ku manaystay Soo Bixinta Rasuulka Muxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) iyagoo yaqaanay Runtiiisa, Aaminimadiisa iyo Wanaagiiisaba, kuna Akhriyi Quraanka, iyo sunada Nabiga iyagoo Horay Baadi u ahaa. Rassulkuna (Naxariis iyo Nabadga iyo eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi yaanan garan Midkiino Imaan Qiyaamada isagoo Xambaarsan riti Qayliyi markaa uu Dhihi: Muxamedow Muxamedow, oon dhihi waxba kaagamo Hanto Eebe waan ku gaadhsiiyey (waa dheeryahay..).

Waxaana soo arrooray wax badan oo ka Digi Xumaanta khiyaamada iyo Cunidda Xaq darro ee Xoola kale, haddaadse iska Khayaanto Ciddaad Aragto, ood iska Cunto waxaad la kulanto, oodan waxba u Aabayelin Taasi ma Islaambaa, Musliminmaduna waa Toosnaan, Eebe ka yaabid, Xaq raacid, XalaaCunid, Wanaag u yeedhid, Xumaan ka Reebid iyo ku dhaqan Dhab ah diinta Islaamka. Aali-Cimraan (161-164).

165. Hadday idin Asiibtay (idinku Dhacday) Dhibaato Waxaad Asiibteen Laba Jibaarkeed (Badar) waxaad dhahdeen xaggee Nooga yimid (Dhibku)

أَوَلَمَّْا أَصَبْتُمْ مَعْصِيَةَ اللَّهِ قَدْ أَصَبْتُمْ مَقَالِيهَا
فَلْتُرْ أُنِي هَذَا قُلْ هُوَ مِنْ عِنْدِ أَنْفُسِكُمْ إِنْ لَمْ يَكُنْ

waxaad dhahdaa Agta Naftiinna, Ee-
baba wax Kasta wuu karaa.

عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٦٥﴾

166. Waxa idinku dhacay Maalintay
kulmeen Labadii Kooxood waa idamka
Eebe iyo inuu Muujiyo Mu'miniinta.

وَمَا أَصْبَحُكُمْ يَوْمَ التَّقَىٰ الْجَمْعَانِ فَيَا ذُنَّ اللَّهِ وَلِيَعْلَمَ
الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٦٦﴾

167. Iyo inuu Muujiyo kuwa Munaafa-
qoobay, oo loo yidhi Kaalay ku Dirira
Jidka Eebe ama Difaaca, waxayna
dheheen Haddaan ognahay Dagaal
waan idin raaci lahayn, iyagu Gaalni-
maday Maalintaas uga Dhawyihiin
Rumeyn, waxay ka odhan Afkooda
waxaan ahayn Quluubtooda, Eebana
waa ogyahay waxay Qarin.

وَلِيَعْلَمَ الَّذِينَ تَفَقَّهُوا وَقِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا قَاتِلُوا فِي سَبِيلِ
اللَّهِ أَوْ ادْفَعُوا قَالُوا لَوْ نَعْلَمُ قِتَالًا لَّاتَّبَعْنَاكُمْ
هُوَ لِلْكَافِرِ يَوْمَئِذٍ أَقْرَبُ مِنْهُمْ لِلْإِيمَانِ يَقُولُونَ
بِأَفْوَاهِهِمْ مَا لَيْسَ فِي قُلُوبِهِمْ وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا
يَكْتُمُونَ ﴿١٦٧﴾

168. waa kuwa ku yidhi Walaalahood
(Munaafiqiintu) iyagoo iska fadhiistay
Hadday na Adeecaan lama Dileen,
waxaad dhahdaa ka Dhawra Naftiinna
Geeri Haddaad Run sheegaysaan.

الَّذِينَ قَالُوا لِلْإِنشَاءِ نَهْمَةٌ وَقَدْ جَاءُوا لَنَا غَوَامًا فَيَا قَوْمَ
فَادْرَأْهُ وَأَعْنِ أَنْفُسَكُمْ الْمَوْتِ إِنْ كُنْتُمْ
صَادِقِينَ ﴿١٦٨﴾

Hadday Muslimiintu Qaadanwaayeen Dhibkii Maalintii Uxud iyaba waxay Dileen ama Qabteen Maalintii Badar Labo Jibaadh, Xaalkuna wuxuu ku dhacay Idam Eebe iyo ogaanshihiis iyo inay kala Muuqdaan Mu'miniinta dhabta ah iyo Munaafiqiinta, waxaana dhacday in Munaafiqiintii iska soo noqotay iyadoo uu Hogaamin Munaafaqii Cabdullahi Binu Ubayi Binu Salool iyagoo sheegey inayna Muuqan waxay u Dagaalamaan, Muslimiintuna ku lahayd war kaalaya Dirira ama Badiya Muuqaalka, Saasay ku Tageen iyagoo sheegi inaan la laayeen kuwii Jahaadka lagu Dilay Haddii Warkooda la maqlo. Ha ka Celiyeen Naftooda Geerida hadday Run sheegi, taasina waa Caadada Munaafiqiinta Calaaca. Aali-Cimraan (165-168).

169. Hana u Malaynina kuwa Lagu
Dilay Jidka Eebe kuwa dhintay, Saas
ma aha waxay ku Noolyihiin Eebahood
Agtiisa Laguna Arzaaqi.

وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قَاتَلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَمْوَاتًا بَلْ أَحْيَاءٌ
عِنْدَ رَبِّهِمْ يُرْفَعُونَ ﴿١٦٩﴾

170. Iyagoo ku Faraxsan wuxuu siiyey
Eebe oo Fadligiisa ah, kuna Bishaaray-
san kuwaan wali Halcelin ee Gadaas-
hooda ah inuusan Korkooda Cabsi iyo
Murugo midna "ahayn".

فَرِحِينَ بِمَاءِ الْغَيْبِ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ وَيَسْتَبْشِرُونَ
بِالَّذِينَ لَمْ يَلْحَقُوا بِهِمْ مِنْ خَلْفِهِمْ أَلَّا خَوْفٌ
عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿١٧٠﴾

171. Waxayna ku Bishaaraystaan Nic-
mo Eebe iyo Fadli iyo inaan Eebe
Dayacayn ajriga Mu'miniinta.

يَسْتَبْشِرُونَ بِنِعْمَةِ رَبِّكَ اللَّهُ وَفَضْلٍ وَأَنْتَ
اللَّهُ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٧١﴾

172. Ee ah kuwa Ajiibay (Maqlay) Eebe iyo Rasuulka ka Dib intuu Asiibay Dhaawac kuwa Wanaag Falay oo ka mid ah oo dhawrsaday waxaa u sugnaaday Ajir wayn.

الَّذِينَ اسْتَجَابُوا لِلَّهِ وَالرَّسُولِ مِنْ بَعْدِ مَا أَصَابَهُمُ الْقَرْحُ
لِلَّذِينَ أَحْسَنُوا مِنْهُمْ وَاتَّقُوا أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿١٧٢﴾

173. Ee ah kuwuu yidhi Dadku (Gaaladu) Dadkii baa idiin kulmay ee ka Cabsada oo u Siyaadiyey Rumeyn, oy dhaheen Kaafiyahanagu waa Ilaahay Isagaana u Fiican Wakiil.

الَّذِينَ قَالَ لَهُمُ النَّاسُ إِنَّ النَّاسَ قَدْ جَمَعُوا لَكُمْ
فَاخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَانًا وَقَالُوا حَسْبُنَا اللَّهُ
وَنِعْمَ الْوَكِيلُ ﴿١٧٣﴾

174. Oo La noqday Nicmo Eebe iyo Fadli oyna Taaban Xumaan Raacayna Raalli ahaanshaha Eebe, Ilaahayna waa Fadli wayn lahaade.

فَاتَّقِلُوا بِغِيْمَةٍ مِنَ اللَّهِ وَقُضِلْ لَكُمْ سَعِيرٌ سَوْءٌ
وَاتَّبِعُوا رِضْوَانَ اللَّهِ وَاللَّهُ ذُو فَضْلٍ عَظِيمٍ ﴿١٧٤﴾

175. Kaasi waa Shaydaan wuxuuna idinku Cabsi Galin Awliyadiisa (Saaxiibadiis) ee ha Cabsanina, ee iga Cabsada Haddaad Mu'miniin tihiin.

إِنَّمَا ذَلِكُمُ الشَّيْطَانُ يُخَوِّفُ أَوْلِيَاءَهُ ۗ فَلَا تَخَافُوهُمْ
وَخَافُوا إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿١٧٥﴾

Ciddii Shahiid lagu Dilo wuxuu ku Noolyahay Eebe Agtiisa isagoo Farxi oo Bishaaraysan Jecelna in Saaxiibadiisu Soo Shihiidaan, Bishaaro, Nicmo iyo Ajir yaana u sugnaaday, waana kuwa Eebe iyo Rasuulka Adeeca inta Dhib ku Dhacay ka Dib, una Adkeystay Markii loo kulmay Eebana Cuskaday, lana Noqday Wanaag iyo Rille Eebe oon kana Cabsanin Warka Shaydaanka ee Eebe ka Cabsaday. Fadliga Shahiidnimada iyo Jihaadka waxaa ku soo Arooray waxbadan waxaa ka mid ah: Inay Arwaaxdoodu ku Jirto shimbiro Daaqi Jannada oo u Dheelmada Tiriigyo Carshiga ku Xidhan. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Waxaa na Kaafiya Eebe Isagaa u Fiican Wakiil, waxaa Yidhi Nabi Ibraahim markii Dabka lagu Tuuray iyo Nabi Muxamed markii lagu Yidhi Dadkiibaa idiin kulmay. Waxaa Fadliga Jahadka iyo Wanaagiisa rumeeya Kuwa Jidka Eebe ee Xaqa ah ku Jahaada. Aali-Cimraan (169-175).

176. Yeyna ku murug galin kuwa u Deg degi Gaalnimada iyagu kama Dhibaan Eebe waxba, wuxuu Dooni Eebe inuusan ugu yeelin Nasiib Aakhiree waxayna Mudan Cadaab Weyn.

وَلَا تَحْزَنْكَ الَّذِينَ يُسْرِغُونَ فِي الْكُفْرِ إِنَّهُمْ لَنْ
يُبْصِرُوا اللَّهَ شَيْئًا يُرِيدُ اللَّهُ الْأَجْعَلِ لَهُمْ حَطَافِي
الْآخِرَةِ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٧٦﴾

177. Kuwa ku Gatay Gaalnimo limaan-ka kama Dhibayaan Eebe waxba waxayna Mudan Cadaab Daran.

إِنَّ الَّذِينَ اسْتَرَوْا الْكُفْرَ بِالْإِيمَانِ لَنْ يُبْصِرُوا اللَّهَ
شَيْئًا وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٧٧﴾

178. Yeyna u Malaynin kuwa Gaaloo-bay inuu Sugidoodu Khayr u tahay, waxaannu u Sugi uun inay Siyaadsadaan Dambi, waxayna mudan Cadaab Dulleeya.

وَلَا يَصْنَعَنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا إِتْمَانًا لِي لَهُمْ حَيْرٌ
لَأَنْفُسِهِمْ ۗ إِنَّمَا نَمْلِي لَهُمْ لِيَزْدَادُوا إِتْمَانًا وَلَهُمْ عَذَابٌ
مُهِينٌ ﴿١٧٨﴾

179. Ma aha Eebe kii kaga Taga Mu'miniinta Sidaad tihiin intuu ka kala Sooco ka Xun iyo kan Fiican, mana aha Eebe kii idin Daaliciya (Tusiya) waxa Maqan, hase yeeshee wuxuu ka dooran Rasuulkiisa Cidduu Doono ee Rumeeya Eebe iyo Rasuulkiisa, Haddaad Rumeysaan Xaqa oo Dhawrsataan waa-xaad Mudanaysaan Ajir Weyn.

مَا كَانَ اللَّهُ لِيَذَرَ الْمُؤْمِنِينَ عَلَىٰ مَا أَنْتُمْ عَلَيْهِ حَتَّىٰ يَمِيزَ الْخَبِيثَ مِنَ الطَّيِّبِ وَمَا كَانَ اللَّهُ لِيُظْلَمَكُمْ عَلَىٰ الْعَقْدِ وَلَكِنَّ اللَّهَ جَبَّتِي مِنْ رُسُلِهِ مَنْ يَشَاءُ فَاصْبِرُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ ۗ وَإِنْ تَوَمَّنُوا وَتَتَقَرَّوْا فَلَكُمْ أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿١٧٩﴾

180. Yeyna u malaynin kuwa ku Bakhayli wuxuu Siyey Eebe oo Fadli ah inay Khayr u Tahay, Sharbayse u Tahay waxaana Luqunta loo Galin waxay ku Bakhaylayeen Maalinta Qiyaame, Eebana iska leh Dhaxalka Samaawaadka iyo dhulka, Eebana waa-xaad Camal Falaysaan waa Ogyahay.

وَلَا يَحْسَبَنَّ الَّذِينَ يَبْخُلُونَ بِمَا أَنزَلَهُمُ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ ۚ هُوَ خَيْرٌ لَّهُمْ بَلْ هُمْ سِرَّاءٌ لَّهُمْ سَيَطْمَنُوهُنَّ مَتَّخِضِينَ بِهِ آيَةً ۚ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ۗ وَاللَّهُ مِيرَاثُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ ۗ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿١٨٠﴾

Cid Gaaloowday waxba hau Murgin'waxba Eebe kama Dhibtee, Aakhirana Nasiib kuma leh, illeen Gaalnimay limaanka ka doorteene, Sugidduna Khayr u ma aha ee waa Dambi Badsasho. Adduunkuna waa Imtixaan si Loo kala Sooco kan Xun iyo kan Fiican, wax og waxa maqanna ma Jiro Eebe Mooyee wuxuu u doortay Rasuuladiisa Ciddu doonay'waase in Xaqa la Rumeeyo lana Dhawrsado, kubakhayl Xaqana Khayr ma aha ee waa Khasaare, Qiyaamana wuxuu imaan isagoo Luqunta ku wada wuxuu ku Bakhaylay, Eebana u Hadhi waxa Cirka iyo Dhulka ku Sugaan waxa la Falina og ee ha loo darbado. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe kor kiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Addoonkaan gudan Zakada Xoolihiisa waxaa laga Dhigaa Masbaraleh oo Raaci oo ka Carari oo raaci isagoo dhihi Waxaan ahay Kansigaagii Markaasuu Aayaddan Akhriyey Cabdullahi. Waxaa wariyey Imaam Axmed iyo Kuwo kale.

Xaqoo la Sheegi waayana way Noqotaa. Aali-Cimraan (176-180).

181. Dhab ahaan yuu u Maqlay Eebe Hadalka Kuwii Yidhi Eebe waa Faqiir Anaguna waxaan nahay Hodan (waa Yuhuud ha halaagmeene) waan Qoraynaa waxay dhihi iyo Diliddooda nabiya ee Xaq daro waxaan u dhahaynaa dhadhamiya Cadaaba Gu-bashada.

لَقَدْ سَمِعَ اللَّهُ قَوْلَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ فَقِيرٌ وَنَحْنُ أَغْنِيَاءُ سَنَكْتُبُ مَا قَالُوا وَقَتْلَهُمُ الْأُنْبِيَاءَ وَغَيْرِ حَقٍّ وَقَوْلِ دُونِ عَذَابِ الْخَرِيقِ ﴿١٨١﴾

182. Taasina waa waxay hormarsatay Gacmahoodu Eebana ma aha Dulmiyaha Addoomada.

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمْتُمْ أَيْدِيكُمْ وَأَنَّ اللَّهَ لَيْسَ بِظَلَّامٍ لِّلْعَالَمِينَ ﴿١٨٢﴾

183. Waa kuwa Yidhi Eebe wuxuu nagula Ballantamay Inaanaan Rumeyn

الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ رَبَّ اللَّهِ عِهْدَ إِلَيْنَا أَلَّا نُؤْمِنَ

Rasuul intuu Nooga keeno Qurbaan (Sadaqo) oy cunto Naar, waxaad dhahdaa waxay idiinla yimaadeen Rasuullo hortay Xujooyin iyo waxaad sheegteen ee Maxaad u Disheen haddaad run sheegaysaan.

لِرَسُولٍ حَقِّي يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَفَلَا تَتَذَكَّرُونَ
قَدْ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مِّنْ قَبْلِ يَأْتِيَنَّكُمْ وَيَأْتِيَنَّكُمْ
فَلَمَّا فَتَنَاهُمْ إِتَّخَذُوا الصَّدَاقَاتِ
صَدَقَاتٍ ﴿١٨٣﴾

184. Hadday ku Beeniyaan waxaa dhab ahaan loo Beeniyey Rasuullo kaa Horreeyey oo la yimid Xujooyin iyo Kutub iyo Kitaab Cad.

فَإِن كَذَّبُوكُم فَقَدْ كَذَّبَ رَسُولٌ مِّنْ قَبْلِكُمْ
جَاءَهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ وَالزُّبُرِ وَالْكِتَابِ
الْمُنِيرِ ﴿١٨٤﴾

Yuhuud iyo wixii la mid ah (Eebe ha Duleeyo,) waa Af Xunyihiin had iyo Jeer intay kaga Sheegaan Eebe inuu Faqiir yahay iyaguna Hodanyihiin markay Maqleen Aayadaha Sadaqada ku Boorin waase laga Abaal marin Hadalkaas, oo la cadaabi waxay Hor marsadeen Darteed'wana Beentood in lagula Ballamay inaanay Rumeeynin Rasuul intay Sadaqadiisu Naaru ka Cunto, Imisaay Rasuullo Dileen Xujooyinna Beeniyeen. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi Markay Soo dagtay: Yaa Eebe Amaah Fiican Amaahiya (Wax Sadaqaysta) yey Yuhuudu tidhi Muxamadow wuu Baahday Eebahaa intuu ka warsado Addoomada Amaah, markaasay soo Degtay Jawaab ahaan Aayadda (waa Maqlay Eebe kuwii Hadalkaa yidhi Eebe waa Faqiir Anaguna Waxaanu Nahay Hodan). Eebaa Hodan ah wax walbana isagaa Awooda Dadkuna waa u Baahanyihiin, waxa la Bixiya Dadkay wax u tartaa ee Ilaahay uma Baahna, ee waa in Laga digtoonaado Wadada Gaalada waxna dar Eebe loo Baxsado si Dadka Baahan loo Kaalmeeyo. Aali-Cimraan (181-184).

185. Nafkasta waxay Dhadhamin Geeri, waxaa uun laydiin Oofin Ajrigiinna Maalinta Qiyaame, Ruuxiise laga iilo Naarta oo la galiyo Janada wuu Liibaanay, Nolosha Adduuna ma aha waxaan Raaxo kado ahayn.

كُلُّ نَفْسٍ ذَائِقَةُ الْمَوْتِ وَإِنَّمَا تُوَفَّقُونَ
أُجُورَكُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فَمَنْ زُحِرَ عَنْ النَّارِ
وَأُدْخِلَ الْجَنَّةَ فَقَدْ فَازَ وَمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا
إِلَّا لَمْتَمِعُ الْعُلُورِ ﴿١٨٥﴾

186. Waan idinku Imtixaamaynaa Xoolihiinna iyo Naftiinna waxaadna ka Maqlaysaan kuwa la siiyey Kitaabka oo idinka horeeyey iyo Mushrikiinta (Gaaladii Carbeed) dhib Badan haddaadse Samirtaan ood dhawrsataan Arrintaasu waa Umuuraha loo Qasdo.

كُلُّ نَفْسٍ ذَائِقَةُ الْمَوْتِ وَإِنَّمَا تُوَفَّقُونَ
أُجُورَكُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فَمَنْ زُحِرَ عَنْ النَّارِ
وَأُدْخِلَ الْجَنَّةَ فَقَدْ فَازَ وَمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا
إِلَّا لَمْتَمِعُ الْعُلُورِ ﴿١٨٥﴾

187. (Xusuuso) markuu Qaaday Eebe Ballanka kuwii la siiyey Kitaabka inaad u Cadaysaan (Xaqa) Dadka Oydaan Qarinin waxayse ka Tuureen Dhabarkooda Gadaashiis waxayna ku gateen Lacag Yar waxaa Xun waxay Gadan.

وَأَذِّنْ لِلنَّاسِ وَأَلَّا تَكْفُرُوا فَمَنْ كَفَرَ بَعْدَ ذَلِكَ مِنْكُمْ
سَاءَ مَا يَحْكُمُ الْقَدِيرُ ﴿١٨٦﴾

188. Haw Maleyn kuwa ku Farxa

لَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ يَفْرَحُونَ بِمَا آتَوْا وَيُحِبُّونَ أَنْ يَحُدُّوهُ

waxay la yimaadaan oo Jecel in lagu Mahdiyo waxayna Falin Haw malayn inay ka Nabadgali Cadaabka waxaana u Sugnaaday Cadaab Daran.

189. Eebaa iska leh Xukunka Samaawaadka iyo Dhulka, Eebaana wax kasta kara.

يَعَالَمُ يَفْعَلُوا فَلَا تَحْسَبْتَهُمْ بِمَقَارِقِينَ
الْعَذَابِ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٨٨﴾

وَلِلَّهِ مَلِكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٨٩﴾

Naf walba way Dhiman waana la Abaalmarin Qiyaamada, Liibaan waa Janno la galo iyo Naar laga nabadgalo Xoolo iyo Naftana waa laysku Imtixaami, Gaaladana had iyo jeer Dhibaa laga maqlaa waxayse u baahantahay Adkaysi iyo Dhawrsasho. Tankale waa Waajib in Xaqa loo Cadeeyo Dadka oon laga Qarinin, Cidiise Xaqa Tuurta oo wax kale oon Qiima lahayn ku badalata Jecelna in waxay Sameeyaan iyo waxayna Sameeyninba lagu Amaano kuwaasu ma aha kuwo Liibaani oo Naar ka Kori illeen Eebaa Xukunka iska leh wax walbana karee, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Eebaana ku Dhaartaye Adduunku ma aha marka Aakhiro loo Eego midkiin oo Farta Badda Galiyey oo ka soo Celiyey mooyee. Tan kale waa in Dadka wax loo Sheego lagana Qarinin.

Nabiguna wuxuu Yidhi: Ruuxii Cilmi la Warsado oo Qariya waxaa lagu Xakamayn Qiyaamada Xakama Naar ah. Aali-Cimraan (185-189).

190. Abuuridda Samaawaadka iyo Dhulka iyo is Khilaafidda Habeenka iyo Maalinta Calaamooyin yaa ugu Sugan kuwa Caqliga leh.

إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاخْتِلَافِ أَلْوَانِ
وَالنَّهَارِ لَآيَاتٍ لِّأُولِي الْأَلْبَابِ ﴿١٩٠﴾

191. Ee ah kuwa ku Xusa Eebe Taagni iyo Fadhi iyo Jiifba, oo ku fikira Abuuridda Samaawaadka iyo Dhulka (iyagoo dhihi) Eebow Umaadan Abuur-in kan (Khalqiga) Baadil (Ciyaar) waad Nasahantahay Ee naga kori Cadaabka Naarta.

الَّذِينَ يَذْكُرُونَ اللَّهَ قِيَامًا وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِهِمْ
وَيَتَذَكَّرُونَ فِي خَلْقِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ رَبَّنَا مَا
خَلَقْتَ هَذَا بَطْلًا تُسَبِّحُكَ فَقِيصًا عَذَابُ النَّارِ ﴿١٩١﴾

192. Eebow adigu ruuxaad Galiso Naarta Dhab ahaan baad u Dulaysay Daalimiintana uma Sugnaanin Gargaa-ryaal.

رَبَّنَا إِنَّكَ مَن تُدْخِلِ النَّارَ فَقَدْ أَخْرَجْتَهُ
وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِن أَنْصَارٍ ﴿١٩٢﴾

193. Eebow Anagu waxaan Maqallay Yeedhe u yeedhi Iimaanka oo dhihi Rumeeya Eebihii waana Rumeynay, Eebahanow noo dhaaf Dambiyadanada Asturna Xumaantanada naguna Dil la Jirka kuwa Baarriga ah (fican).

رَبَّنَا إِنَّا أَسْعَمْنَا مُنَادِيًا يَدْعُو إِلَى الْإِيمَانِ أَنْ
ءَامُرُوا بِرَبِّكُمْ فَآمَنَّا رَبَّنَا فَاغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا
وَكَفِّرْ عَنَّا سَيِّئَاتِنَا وَتَوَقَّنَا مِنَ الْأَنْتَرَارِ ﴿١٩٣﴾

194. Eebahanow na sii waxaad noogu Yaboohday Rasuuladaada hana na

رَبَّنَا وَءَاتِنَا مَا وَعَدْتَنَا عَلَىٰ رُسُلِكَ وَلَا تُخْزِنَا يَوْمَ

Dulleyn Maalinta Qiyaame, Adigu ma Baajisid Ballane.

الْوَيْمَةَ إِنَّكَ لَا تُخْلِفُ الْمِيعَادَ ﴿١٩٤﴾

Eegidda Cirka iyo Dhulka, Habeenka iyo Maalinta waxaa ugu Sugan Muminiinta Caqliga leh Calaamadda Awoodda Eebe iyo Jiridiisa, kuwaas had iyo Jeer Eebe Xusa ogna inaan Eebe Ciyaar u Abuurin Adduunka, kana Magangala Eebe Naarta, mar hadday Xaqa Rumeeyeen iyo inaan Eebe Dulleyn Maalintaas. Cirka iyo Dhulka, iyo Khalqiga kalaba waa in la eego laguna waano Qaato, Dibna wax looga Fikiraa, Xadiith Dheer waxaa ku Sugnaaday in Bilaal u yimid Nabigoo ooyi markaas uu yidhi maxaa kaa oohin, Nabiguna yidhi: Magacaa Be'maxaan la Ooyi waayi waxaaba laygu soo dajiyey Xalay Aayaddan (Abuuridda Samooyinka, Dhulka iyo is Khilaafidda habeenka iyo Maalinta Calaamad baa ugu Sugan kuwa Caqliga leh) wuxuuna yidhi waxaa Halaagsamay Ciddii Akhrida oo Fikirin. Waxaa wariyey Ibnu Marda Weyhi.

Xasan Basrina wuxuu yidhi: Fikirku waa Muraayadda ku tusin Wanaagaada iyo Xumaantaada. Saas darteed waa in Had iyo jeer la Fikiraa lana Xisaabtamaa, Eebana lagu Xidhnaado Wanaag Adduun iyo Aakhirana lagu dadaalaa. Aali-Cimraan (190-194).

195. Wuxuu ku Ajiibay Eebahood Anagu ma dayacno Camal Mid Camal Falay oo Idinka mid ah Lab iyo Dhadig, Qaarkiin Qaarbuu ka ahaaday kuwa Hijrooday ee laga Bixiyey Guryahooda oo lagu Dhibay Jidkayga oo Dagaalamay oo la Dilay waannu Asturi Xumaanahooda waxaana Galin Jannooyin ay Dureeri Dhexdeeda Wabiyaal waana Abaal marin Eebe Xagiisa ah, Eebe agtiisaana Abaalmarin Wanaagsan tahay.

فَأَسْتَجَابَ لَهُمْ رَبُّهُمْ أَنِّي لَا أُضِيعُ عَمَلَ عَمَلٍ مِّنْكُمْ مِّنْ ذَكَرٍ وَأُنثِيَ بَعْضُكُم مِّنْ بَعْضٍ فَالَّذِينَ هَاجَرُوا وَأُنزِلُوا مِن رَّبِّهِمْ وَأُوذُوا فِي سُبُلِي وَوَقَّتُوا لِي وَأُقْتَلُوا لَأُكَفِّرَنَّ عَنْهُمْ سَيِّئَاتِهِمْ وَلَأُدْخِلَنَّهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ تَوَابًا مِّنْ عِنْدِ اللَّهِ وَاللَّهُ عِنْدَهُ حُسْنُ الْقَوَابِ ﴿١٩٥﴾

196. Yeyna ku Dhagrin ku Gadoonka kuwa Gaaloobay ee Dhulka (Adduunka).

لَا يَغْرُبُكَ تَقَلُّبُ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي الْبِلَادِ ﴿١٩٦﴾

197. Waa Raaxo yar kadib Hoygoodu waa Jahannamo, iyadaana u xun Gogol.

مَتَّعَ قَلِيلًا ثُمَّ مَأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ وَنِيسَ الْمِهَادِ ﴿١٩٧﴾

198. Hase Yeeshee kuwa ka Dhawrsada Eebahood waxay mudan Jannooyin ay dureeri Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku waari Dhexdeeda, waa marti Qaad Xagga Eebe ka ahaaday, waxa Eebe agtiisa ah yaana u Khayr roon kuwa Baarriga ah (Wanaagsan).

لَسِيْنِ الَّذِينَ اتَّفَقُوا رَبُّهُمْ لَهُمْ جَنَّتٌ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا نُنزِلُ لِمَن نُّزِلَ لِمَن عِنْدَ اللَّهِ وَمَا عِنْدَ اللَّهِ خَيْرٌ لِّلْآبِرَارِ ﴿١٩٨﴾

199. Ehelu Kitaabka waxaa ka mid ah mid Rumeyn Eebe iyo waxa laydiin soo

وَأَمَّا مَن أَهْلَى الْكِتَابِ لَمَن يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَمَا


dejiyey iyo wixii loo soo Dejiyey iyagoo u Khushuuci Eebe kumana Gataan aayaadka Eebe Qiimo Yar, kuwaas waxaa u Sugnaaday Ajirgoda Eebahood Agtiis, Eebana waa Deg degtaa Xisaabtiisu.

200. Kuwa (Xaqa) rumeeyow Samra oo Samirtama kuna Nagaada Dhawridda (Xuduudda Islaamka) kana Dhawrsada Eebe waxaad Mudantihiin inaad Liibaantaane.

أَنْزَلَ إِلَيْكُمْ وَمَا أَنْزَلَ إِلَيْهِمْ خَشِيعِينَ لِلَّهِ
لَا يَشْتَرُونَ بِعَاقِبَتِ اللَّهِ ثَمَنًا قَلِيلًا أَوْ كَثِيرًا
لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ إِنْ اللَّهُ سَرِيعُ
الْحِسَابِ ﴿٢٠٠﴾

يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا أَصْبِرُوا وَصَابِرُوا
وَرَابِطُوا وَأَتَقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تَفْلِحُونَ ﴿٢٠١﴾

Eebe ma dayaco Camal Ruux Lab iyo Dhadigba kuwa dar Eebe u hijrooda ee Guryahooda laga Bixiyey ee lagu dhibo Jidka Eebe oo Dagaalama oo la Dilo Eebe wuxuu ku Abaalmarin Dambi Dhaaf iyo Janno. Mana aha in lagu Dhagramo Gagadoonka Gaalada iyo Shaqadooda Adduunyo kanay Sameeyeen oo meelheblay Gaadheen iyo waxaasay soo Saareen, illeen waa wax yar oo Naaru uga Dambayso. Kan Eebe ka Dhawrsadaase Khayrbaa u Yaal Eebe Agtiisa, Eheluu Kitaabkana waxaa ka mid ah kuwo Xaqa Rumeeyey Eebaana Abaal marin, tan kale waa in la adkaysto lana Jahaado Islaamkana la ilaaliyo si loo Liibaano, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Kunagaadi Jidka Eebe Maalin yaa ka Khayr badan Adduunka, iyo waxa ku Sugaan korkiisa. (Bukhaari) taasina waxay ku tusin Fadliga jahaadka Jidka Eebe iyo Daaficidda Xuduudda Islaamka iyo Adkeysiga Arrintaas yey Liibaantu tahay Sidaas. Markalana Rassulku (N.N.E.K. hayelee) wuxuu yidhi: Laba Indhood ma Taabato Naari il u ooyday Cabsi Eebe iyo il bariday iyadoo Ilaalin Jidka Eebe. (Tirmadi) Waana kaas sharafta Jahaad, Muslimiintuna waxaa Xoog, Sharaf iyo Cisi ugu Dambaysay markay ka taggen Jahaadka iyo Difaaca Xuduudda Islaamka. Aali-Cimraan (195-200).



Suurat An-Nisaa'



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Dadow ka Dhawrsada Eebihiina Idinka Abuuray Nafkaliya (Adam) kana Abuuray xaggeeda Haweenaydeeda (Xaawo) kana Abuuray Xaggooda Rag Badan iyo Haweenba, ka Dhawrsada Eebihiinna aad wax isku Warsataan iyo Qaraabada, Eebana wuxuu u Yahay Korkiinna Illaliye.

يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثِيرًا وَنِسَاءً وَاتَّقُوا اللَّهَ الَّذِي تَسَاءَلُونَ بِهِ وَالْأَرْحَامَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ قَبِيلاً ﴿١﴾

2. Siiya Agoonta xoolahooda hana ku Badalina Xumaan Wanaag, hana Cuni-na xoolahooda La jirka Xoolihiinna, Taasina waa Dambi weyn.

وَأَتُوا الْيَتَامَىٰ أَمْوَالَهُمْ وَلَا تَتَّبِعُوا الْحَيْثُ بِالْطَّبِيبِ وَلَا تَأْكُلُوا أَمْوَالَهُمْ إِلَىٰ أَمْوَالِكُمْ إِنَّهُ كَانَ حُوبًا كَبِيرًا ﴿٢﴾

3. Haddaad ka Cabsataan inaydaan ku Cadaalad Falin Agoonta Guursada wixii idiin Wanaagsan oo Haween ah, Labo, Saddex iyo Afar, Haddaad ka Cabsataan inaydaan Caddaalad Falin Mid kaliya (Guursada) ama waxay Hanatay Gacmihiinnu Saasaa u Dhaw inaydaan Jawrfaline.

وَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تُقْسِطُوا فِي الْيَتَامَىٰ فَانكِحُوا مَا طَابَ لَكُمْ مِنَ النِّسَاءِ مِمَّا وَرَرْتُمْ فَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تَعْدِلُوا فَوَاحِدَةٌ أَوْ مَمْلُوكَةٌ تِلْكَ أَدْنَىٰ أَلَّا تَعْدِلُوا ﴿٣﴾

4. Siiya Haweenka Meherkooda isagoo Waajib ah hadday idiinka Raali noqoto wax ka mid ah Naftoodu Cuna idinkoo Shifaysan oo Kadban.

وَأَتُوا النِّسَاءَ صِدْقَتِهِنَّ بِنِعْمَةٍ فَإِنْ طِبَّنَ لَكُمْ عَسَىٰ وَ مِنْهُ نَفْسًا فَكُلُوهُ هِنَاءًا مَرِيئًا ﴿٤﴾

Suuraaddu waa Suurad Weyn oo Daryeeli Xaqa Haweenka iyo Agoonta iyo kuwa kale waxayna Fari in Eebe laga Dhawrsado illeen waa kan Naf kaliya Dadka ka Abuuraye, Taasoo ah Nabi Aadam, waxaa kaloo Beenaalayaashu ka Sheegi Abuurka Dadka waa waxaan Jirin, sidoo kale waxay fartay Dhawrida Xaqa Qaraabada, Agoonta, Guurka oo lagu Caddaalad Faloo haddaan la karayna mid kaliya la Guursado, iyo in Haweenka la Siiyo Meherkooda waxay ka Raalli Noqdaan mooyee, Diinta Islaamkuna wax badan bay ka Digtay Dhibka Agoonta Iyo Haweenka, waxaa Sugnaaday: U caabud Eebe sidii Adoo Arka, Haddaadan Arkin Isagaa ku Arkeec.

Saas darteed waa in la Dhawraa Xuquuqda Dadka Gaar ahaan Agoonta oon la Cunin Xoolahooda Looona Wanaag Faloo, iyo haweenka oo la Siiyo Xaqooda iyo Meherkooda lana Dulmiyin. An-Nisaa' (1-4).

5. Ha Siinina Sufahada (aan is maamuli karin) xoolihiinna Alle idiinka yeelay tu noloshiinnu ku taagan tahay, ka Quudiyi kana Arradbixiya una Dhaha Hadal Fiican.

وَلَا تَوْنُوا السُّنْمَاءَ ۖ أَمُولِكُمْ إِلَىٰ جَعَلَ اللَّهُ لَكُمْ فِيهَا وَأَزْوَاجَهُمْ فِيهَا وَأَسْوَهُمْ وَقُولُوا لَهُمْ قَوْلًا مَعْرُوفًا ﴿٥﴾

6. Imtixaamana Agoonta markay Gaadhaan Guur Haddaad ku Aragtaan (Ogaataan) xil kasnimo siiya iyaga Xoolahooda hana u Cunina Xad gudub iyo ka degdagis intayna Weynaan, Ruuxii Hodan ah ha dhawrsado Ruuxii Faqiir ahna ha ka Cuno si Wanaagsan, markaad u Dhiibtaan Xoolahooda Marag u yeela, waana ku Filanyahay Eebe Xisaabiye.

وَابْتَلُوا الْيَتَامَىٰ حَتَّىٰ إِذَا بَلَغُوا النِّكَاحَ فَإِنْ آنَسْتُمْ مِنْهُمْ رُشْدًا فَادْفَعُوا إِلَيْهِمْ أَمْوَالَهُمْ وَلَا تَكُونُوا إِسْرَافًا ۖ وَمَنْ يَدْرَأْ أَنْ يَكْبِرُ لَهُ ۖ وَمَنْ كَانَ غَنِيًّا فَلْيَسْتَعِيفْ ۖ وَمَنْ كَانَ فَقِيرًا فَلْيَأْكُلْ بِالْمَعْرُوفِ ۚ فَإِذَا دَفَعْتُمْ إِلَيْهِمْ أَمْوَالَهُمْ فَأَشْهِدُوا عَلَيْهِمْ ۚ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ حَسِيبًا ﴿٦﴾

7. Ragga waxaa u Sugnaaday Qayb ka mid ah waxay ka tageen Labada Waalid iyo Qaraabadu Haweenkana waxaa u Sugnaaday Qayb ka mid ah waxay ka Tageen Labada Waalid iyo Qaraabadu kiisa Yar iyo kiisa Badanba, isagoo ah Qaddar la Waajibiyey.

لِلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِّمَّا تَرَكَ الْوَالِدَانِ وَالْأَقْرَبُونَ وَلِلنِّسَاءِ نَصِيبٌ مِّمَّا تَرَكَ الْوَالِدَانِ وَالْأَقْرَبُونَ مِمَّا قَلَّ مِنْهُ ۚ أَوْ كَثُرَ ۚ نَصِيبًا مَّفْرُوضًا ﴿٧﴾

Dadka Muslimka ah waa Mid kaliya, waana inay is dhaqaaleeyaan, Ciddii Xoolo leh oon is Maamuli karin waa in Gaacanta loogu hayaa, laguna Dhaqaaleeyaa, lana Imtixaamo markay qaangaadhaan hadday Maamuli karaanna loo Dhiibo, oon loona Cunin Xadgudub iyo ka Deg degid weynaansho, Ruuxii Hodan ah ha Dhawrsado, kii Faqiir ahna ha ka Cuno si Dhawrid ah, marka Xoolaha la Siinna Marag ha loo yeelo Isagoo Eebe Xisaabiye ku Filanyahay. Rag iyo Haween mid kastaa Qaybuu ku leeyahay waxay ka Tagaan Waalidkood, ama Qaraabadii Yaraa iyo Badnaaba, waa Qader Xukuman. Waxaa Sugnaatay in Nin u Yimid Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuuna ku Yidhi: Waxaan hayaa Agoon Xoola leh Anna Xoolo ma lihi ee wax ma ka Cunaan, wuxuuna ku Yidhi: Ka Cun si fiican oon Xad Gudub ahayn. Taasina waxay ku tusin Dhawridda Xuquuqda Dadka Tabarta yar, iyo Ilalinta Arrimahooda, iyo inaan lagu Xad Gudbin. An-Nisaa' (5-7).

8. Hadday Joogaan Qaybta Qaraabo, Agoon iyo Masaakiin (aan dhaxlayn) wax ka Siiya una dhaha Hadal Wanaagsan.

وَإِذَا حَضَرَ الْقِسْمَةَ أُولُو الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسْكِينُ فَازْرُقُوهُمْ مِنْهُ وَقُولُوا لَهُمْ قَوْلًا مَعْرُوفًا ﴿٨﴾

9. Hana ka Cabsadeen kuwa Hadday kaga Tagaan Gadaashooda Caruur Tabar Yar una Cabsan lahaa hana ka Dhawrsadeen Eebe hana Dheheen Hadal Toosan.

وَلْيَحْشِ الَّذِينَ لَوْ تَرَكَوْا مِنْ خَلْفِهِمْ ذُرِّيَةً ۖ ضَعُفًا خَافُوا عَلَيْهِمْ فَلْيَتَّقُوا اللَّهَ وَلْيَقُولُوا قَوْلًا سَدِيدًا ﴿٩﴾

10. Kuwa u Cunaya Xoolaha Agoonta Dulmi (Xaq darro) waxay uun ku Cunayaan Calooshooda Naar waxayna Gali Saciir.

11. Wuxuu idiin Dardaarmi Eebe Caruurtiinna; kan Lab wuxuu mudan yahay Qaybta Labo Dhadig oo kale Hadday Yihiin Haween ka Sarreeya Labo waxay Mudan Labo* Dalool wuxuu ka Tagay, hadday tahay mid waxay Mudan Nus, Labada Waalidna mid kastoo ka mid ah wuxuu Mudan Sudus (Lix meelood meel) Hadduu ka Dhintay (Ilmahoodu) Caruur, hadduu Caruur lahayn oy Dhaxlayaan Labada Waalid Hooyadu waxay Mudan Saddex Meelood Meel, Hadduu Walaalo leeyahay Hooyadu waxay Mudan Sudus Dardaaran ka iyo Daynta ka Dib, Aabayaalkiina iyo Wiilashana ma Ogidin Kooda idinku Dhaw Nacfi, waa Faralyeel "Qaddaraad" Eebe, Ilaahayna waa Oge Falsan.

إِنَّ الَّذِينَ يَأْكُلُونَ أَمْوَالَ الْيَتَامَىٰ ظُلْمًا إِنَّمَا يَأْكُلُونَ فِي بُطُونِهِمْ نَارًا وَسَيَصْلَوْنَ

سَعِيرًا ﴿١٥﴾

يُوصِيكُمُ اللَّهُ فِي أَوْلَادِكُمْ لِلَّذِي كَرِهَ مِثْلَ حِظِّ الْأُنثِيَيْنِ فَإِن كُنَّ نِسَاءً فَوْقَ اثْنَتَيْنِ فَلَهُنَّ ثُلُثَا مَا تَرَكَ وَإِن كَانَتْ وَاحِدَةً فَلَهَا النِّصْفُ وَلِأَوْلَادِكُمُ النِّصْفُ مِمَّا تَرَكَ إِنْ كَانَ لَهُ وَلَدٌ فَإِن لَمْ يَكُن لَّهُ وَلَدٌ وَوَرِثَهُ أَبَوَاهُ فَلِأُمِّهِ الثُّلُثُ إِنْ كَانَ لَهُ إِخْوَةٌ فَلِأُمِّهِ السُّدُسُ مِنْ بَعْدِ وَصِيَّةٍ يُوصِي بِهَا أَوْ دِينَ مَّا آتَاكُمْ وَأَبْتَاكُمْ وَآتَاكُمْ لِأَن تَرْوُونَ أَنفُسَكُمْ نَفْعًا فَرِيضَةً مِنَ اللَّهِ إِنْ أَلَّفَهُ كَانَتْ عَلَيْهِ حَكِيمًا ﴿١٦﴾

Aayadda hore waxay Fari in hadday Qaybta joogaan Dad aan Dhaxalka lahayn oo Qaraabo, Agoon iyo Masaakiin ah wax laga siiyo, Tan kalana in la Dhaqaaleeyo Caruurta Tabar yar sidaad u Jeceshahay in haddaad ka tagto iyagoo kale loo Dhaqaaleeyo, iyo inaan la Cunin Xoolaha Agoonta Ciddi Cuntana waxay Cuni Naar, Aayadda dambana waxay Caddaysay Dhaxalka waxayna ka midtahay Saddexda Aayadoo ee Suuraddan ku Sugaan ee ka Warramay Dhaxalka, Barashada Dhaxalkana waxaa ku soo arorray isku Boorin, Sida: Cilmigu waa Saddex waxa ka soo Hadhay waa Siyaado: Aayad Sugaan, Sunno Taagan, ama Fariido Caadil ah, waxaa kaloo Sugnaaday: Barta Faraa'isha Barana Dadka waa Cilmiga Nuskiye, Waana la halmaami, waana waxa ugu Horreeya ee laga Siibi Umaddayda. Saasaana loo Caddeeyey'oo loo Muujiyey. An-Nisaa' (8-11).

* Saddex meelood laba meel oo ah xoolihii marka saddex loo qeeybiyay labadiisa

12. Waxaa idiin Sugnaaday Nus waxay ka Tagaan Haweenkiinnu haddayna Ilmo lahayn, haddayse la haayeen Ilmo waxaad leedihiin Rubuc (Afar meelood meel) waxay ka tagaan Dardaaran ay dardaarmeen iyo Dayn ka Dib, Haweenkuna waxay Mudan Rubuc waxaad ka Tagteen Haddaydaan Ilmo lahayn, haddaad Ilmo leedihiin waxay

* وَأَكُمُ نِصْفُ مَا تَرَكَ أَزْوَاجُكُمْ إِنْ لَمْ يَكُن لَّهُنَّ لَهْتٌ وَلَدٌ فَإِن كَانَتْ لَهُنَّ وَلَدٌ فَلِكُلِّ الرُّبُعِ مِمَّا تَرَكَنَّ مِنْ بَعْدِ وَصِيَّةٍ يُوصِي بِهَا أَوْ دِينَ مِمَّا تَرَكَنَّ إِنْ لَمْ يَكُن لَّهُنَّ رُبُعٌ فَإِن كَانَتْ لَكُمُ وَلَدٌ فَلَهُنَّ الثُّلُثُ مِمَّا

mudan thumun (Siddeed Meelood meel) waxaad ka tagtaan, dardaaran aad dardaarmaysaan iyo Dayn ka Dib, hadduu yahay Ninku mid la Dhaxli Waalid iyo Ilmo la'aan ama Haweenay-du isagoo leh Walaal ama Walaashiis mid kasta wuxuu Mudan Sudus (Hadday la hooya yihiin) hadday yihiin wax ka badan intaas waxay wadaagi thuluth (Saddexmeelood meel) Dardaaran la dardaarmo iyo Dayn ka Dib, isagoon Dardaaranka Cidna lagu Dhibayn, waana Dardaaran Eebe, Ilaahayna waa Oge Dulsan.

تَرَكْتُمْ مِنْ بَعْدِ وَصِيَّتِ رُؤُوسَ بِيهَا أَوْدِيْنٌ
وَإِنْ كَانَتْ رَجُلٌ يُورِثُ كَلَلَةً أَوْ امْرَأَةً
وَأَهْلًا أَوْ آخْتًا فَلِكُلِّ وَحِدٍ مِّنْهُمَا الشُّدُوسُ
فَإِنْ كَانُوا أَكْثَرَ مِنْ ذَلِكَ فَهُمْ شُرَكَاءُ
فِي الثَّلَاثِ مِنْ بَعْدِ وَصِيَّتِ رُؤُوسَ بِيهَا
أَوْدِيْنٍ غَيْرِ مُصَاوَرٍ وَصِيَّتِ مِنَ اللَّهِ
وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَلِيمٌ ﴿١٢﴾

Aayaddanna waa Aayadda kale ee Caddaysay Dhaxalka, iyo in Cid walba la Siin waxay Mudatay marka laga bixiyo Dardaaranka iyo Daynta, waana Arrin Eebe adkeeyey Caddeeyeyna, Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi Eebe wuxuu siiyay Ruux kastaba Xaqiisa ee u dardaaran mid wax dhaxli ma Jiro. (Waa saxiix), waxaa kaloo sugnaatay Dardaaranka oo laysku Dhibo waa Dambiyada Waaweyn. Saas darteed waa in Cid walba la siiyo wixii Eebe u Sugay, Dardaaran iyo kala Jeclaysina inaan lagu dhibin Ruux Xaqiis, Ileen Eebaa Saas faraye, waana in la maqla amarkiisa si loo liibaano Aakhiro iyo Adduunba. An-Nisaa' (12).

13. Taasi waa Xuduud Eebe, Ruuxii Adeeca Eebe iyo Rasuulkiisa wuxuu Galin Jannooyin ay Dareeri Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku Waari Dhexdeeda, Taasina waa Liibaan weyn.

سَلِّكَ خُدُودَ اللَّهِ وَمَنْ يُطِيعِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ
يُدْخِلْهُ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا
الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا ذَلِكَ الْقَوْرُ
الْعَظِيمُ ﴿١٣﴾

14. Ruuxiise Caasiya Eebe iyo Rasuulkiisa oo Tallaaba Xuduudiisa wuxuu Galin Naar isagoo ku Waari Dhexdeeda, wuxuuna Mudan Cadaab wax Dulleeya.

وَمَنْ يَعِصِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَبِتَعَدَّ
خُدُودَهُ، يَدْخِلْهُ نَارًا خَالِدًا فِيهَا وَلَهُ
عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿١٤﴾

15. Kuwa la imaan Xumaan (Zino) oo Haweenkiinna ka mid ah, Marag uga Dhiga Afar idinka mid ah, hadday ku marag Kacaan ku Haya Guryaha intay ka Disho Geeridu ama u yeelo Eebe Waddo.

وَالَّتِي يَأْتِيَنَّ الْفُجْحَةَ مِنْ نِسَائِكُمْ فَاسْتَشْهِدُوا
عَلَيْهِنَّ أَرْبَعَةً مِنْكُمْ فَإِنْ شَهِدُوا فَأَمْسِكُوهُنَّ
فِي الْبُيُوتِ حَتَّى يَتَوَفَّيَهُنَّ الْمَوْتُ أَوْ يَجْعَلَ
اللَّهُ لَهُنَّ سَبِيلًا ﴿١٥﴾

16. Labadii la Timaadda Xumaanta (Zinada) oo idinka mid ah Dhiba Haddayse Toobadkeenaan ooy Wanaagsanaadaan ka Jeedsada Xagooda, Eebana waa Toobad aqbale Naxariista.

وَالَّذَانَ يَأْتِيَنَّهُا مِنْكُمْ فَعَادُوْهُمَا فَإِنْ تَابَا وَأَصْلَحَا فَأَعْرِضُوْا عَنْهُمَا إِنَّ اللَّهَ كَانَ تَوَّابًا رَّحِيْمًا ﴿١٦﴾

Aayadaha la soo Sheegay waxay Caddeeyeen Qaddar iyo Qaybta Ruux kasta iyo in Eebe Ruuxba Qayb siiyay, u Dhawaanshaha Ruuxa Dhintay iyo Dhibaataadiisa wuxuuna Faray inaan la Tallaabin Xuduudaas Eebe oon Cidna loo Badinin midna loo Yareynin, waase in loo daayo Xukunka Eebe iyo Qaybintiisa, Ciddii Saas Fulisana Abaalkeedu waa Janno, tii ka leexatana waxay Mudan Ciqaab daran iyo Cadaab wax Dulleeya. Tan kale Islaamku markuu Bilaawday Hadday Haweenaydu Xumaan Zino ku Kacdo marag baa loo yeeli Jiray gurigana way iska Joogi Jirtay intay ka Dhimato ama Sharci Caddeeyo Xaalkeeda, Labada Kala Zinaysatana waxaa lagu Ciqaabi jiray Dhib aan Saas u Weynayn, Hase yeeshee waxaa ku Soodagay Arrintaas Xukun ah in Ciddii ku Kacda Xaalkaas isagoo horay wax u Guursaday isna Arkeen lagu Ciqaabi Dhagax lagu Dilo, Kuwaan hadda ka Hor Guursaninna Boqol Ulood lagu Dhufto, Saasuu Rasuulku (Naxariis iyo Nabadgalye Eebe korkiisa ha yelee) yidhi: Iga Qaata Labada Bikaarada ah waa Boqol Ulood, Labada wax Guursatayna waa Boqol Ulood iyo Dhagax lagu dilo. (Muslim) An-Nisaa' (13-16).

17. Toobadda (Aqbalkeeda) waxay Eebe uga ahaatay kuwa Fala Xumaha iyagoo Jaahil ah markaas Toobad keena Waqti dhaw Kuwaas wuu ka Toobad aqbalaa Eebe korkooda, Eebana waa Oge Falsan.

إِنَّمَا التَّوْبَةُ عَلَى اللَّهِ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ السُّوْءَ بِجَهْلَةٍ لَّمْ يُتُوْبُوا مِنْ قَرِيْبٍ فَأُولَئِكَ يَتُوْبُ اللَّهُ عَلَيْهِمْ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيْمًا حَكِيْمًا ﴿١٧﴾

18. Uma aha Toobaddu ku Fala Xumaha intuu uga Yimaaddo Midkood Geeridu markaas dhaha Anigu waxaan Toobad keeni hadda, iyo Kuwa Dhi-man Iyagoo Gaala ah, Kuwaas waxaan u Darabnay Cadaab Daran.

وَلَيْسَتِ التَّوْبَةُ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ السَّيِّئَاتِ حَتَّىٰ إِذَا حَضَرَ أَحَدَهُمُ الْمَوْتُ قَالَ إِنِّي تُبْتُ الْفَنَ وَلَا الَّذِينَ يَمُوتُونَ وَهُمْ كَمَا تُرُوا أُولَئِكَ أَغْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابًا آَلِيْمًا ﴿١٨﴾

19. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow idiinma Banaana inaad u Dhaxashaan Haweenka Xoog iyo inaad dhibtaan si aad ula tagtaan (Qaadataan) Qaar waxaad Sii-seen inay la Yimaadaan Xumaan Cad Mooyee, kulana Noolaada si Fiican, haddaad Kahataan waxaa Suurowda inaad Kahataan wax uu Yeelo Eebe dhexdiisa Khayr Badan.

يَأْتِيَنَّهُا الْآيَاتُ ءَامِنُوْا لِأَيِّحُلْ لَكُمْ أَنْ تَرْوُوْا النِّسَاءَ كَرِهًا وَلَا تَعْضُلُوْهُنَّ لِتَذَهُبُوا بِبَعْضِ مَا ءَاتَيْتُمُوْهُنَّ إِلَّا أَنْ يَأْتِيَنَّ بِعَدْوٍ مِّنْ بَيْنِيْكُمْ وَعَايِرُوْهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ فَإِنْ كَرِهْتُمُوْهُنَّ فَعَسَىٰ أَنْ تَكْرَهُنَّ سَيِّئًا وَيَجْعَلَ اللَّهُ فِيْهِ خَيْرًا كَثِيْرًا ﴿١٩﴾

20. Haddaad Doontaan inaad ku Bad-

وَإِنْ أَرَدْتُمْ أَنْ تَبْتَذِلُوا زَوْجَ مَكَانٍ زَوْجٍ

dashaan Haweenay mid kale idinkoo Siiyey Meher (Badan) ha ka Qaadanina Xaggiisa waxba, Ma waxaad Qaadanaysaan Been iyo Dambi Cad.

وَأَتَيْتُمْ إِخْوَانَكُمْ وَقَطَّارًا فَمَا تَأْخُذُ وَأَمْنَهُ
سَيِّئًا أَمَا تَأْخُذُونَ بِهِ تَنَاوَأْتُمَا مَيْتًا ﴿١٦﴾

21. Seed uga Qaadanaysaan idinkoo Qaar kiin Qaar Arkay, ood kana Qaaddeen Ballan Adag.

وَكَيْفَ تَأْخُذُونَهُ وَقَدْ أَفْضَى بَعْضُكُمْ إِلَى
بَعْضٍ وَأَخَذْنَ مِنْكُمْ مِيثَاقًا غَلِيظًا ﴿١٧﴾

22. Ha Guursanina waxay Guursadeen Aabayaashiin wixii hor maray mooyee, waa Xumaan iyo wax loo cadhoodo Waddana Iyadaa u xun.

وَلَا تَنْكِحُوا مَا نَكَحَ آبَاؤُكُمْ مِنَ
النِّسَاءِ إِلَّا مَا قَدْ سَلَفَ إِنَّهُ كَانَ فَحِشَةً
وَمَقْتًا وَسَاءَ سَبِيلًا ﴿١٨﴾

Dadku wuu Dambaabi waase inuu Toobadkeeno Suginna inta Geerida uga imaan Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Eebe wuu Aqbalaa Toobadda Addoonkiisa intaan Sakaraadku u Imaan.

Mujaahidna Wuxuu yidhi: Cid kastoo Eebe Caasiday waa Jaahil Intay ka tagto. Aayadaha kale waxay Caddayn inaan la Dulmiyin Haweenka, lana Dhibin, Xoolahoodana laga Xoogin, waxaa kale oo Reebban in la Guursado Haweenaydii Aabahaa, Arrimahaasuna waa Reebbanyihiin, waana Dambi Weyn. An-Nisaa' (17-22).

23. Waxaa laydinka Reebay Hooyooyinkiin (inaad Guursataan) iyo Gabdhihiinna, Walaalihiin, Eedooyinkiin, Habaryarihiin, Gabdhaha Walaalkaa, Gabdhaha walaashaa, Hooyooyinka idin Nuujiyey, Walaalaha Nuugmada Hooyooyinka Haweenkiinna, Gabdhaad Dhaqaalaysaan, ee Haweenkiinna aad is aragteen Dhaleen, Haddaydaan is arkin wax dhib ah (Danbi) ma saarra korkiinna, Haweenka Wiilashiinna Dhabta ah, iyo inaad kulmisaan Labo Walaalo ah wixii horay maray mooyee, Eebana waa u Dhaafe Naxariista.

حُرِّمَتْ عَلَيْكُمْ أُمَّهَاتُكُمْ وَبَنَاتُكُمْ
وَأَخَوَاتُكُمْ وَعَمَّاتُكُمْ وَخَالَاتُكُمْ
وَبَنَاتُ الْأَخِ وَبَنَاتُ الْأُخْتِ وَأُمَّهَاتُكُمْ
الَّتِي أَرْضَعْنَكُمْ وَأَخَوَاتُكُمْ مِنَ الرَّضَاعَةِ
وَأُمَّهَاتُ نِسَائِكُمْ وَرَبِّبَاتُكُمْ الَّتِي فِي
حُجُورِكُمْ مِنْ نِسَائِكُمُ الَّتِي دَخَلْتُمْ
بِهِنَّ فَإِنْ أَتَيْتُمْ بِهِنَّ فَلا
جُنَاحَ عَلَيْكُمْ وَحَدَّيْهِلْ أَبْنَاءَكُمْ
الَّذِينَ مِنْ أُمَّهَاتِكُمْ وَأَنْ تَجْمَعُوا
بَنَاتِ الْأَخْتَيْنِ إِلَّا مَا قَدْ سَلَفَ إِنَّ
اللَّهَ كَانَ عَلِيمًا رَحِيمًا ﴿١٩﴾

24. (Waxaa Kaloo idinka reebban) Haweenka la Qabo, waxay Hantaan

* وَالْمُحْصَنَاتُ مِنَ النِّسَاءِ إِلَّا مَا مَلَكَتْ

Gacmihiinnu mooyee, Kitaabka Eebaa korkiinna ah, waxaa laydiin banneeyey waxa ka Soo hadhay kuwaas inaad ku dalabtaan Xoolahiinna idinkoo dhawsoon oon Xumaan (Zino) Falin, waa xaad ku intifaacdaan Xaggooda Siiya Meherkooda, waa Qadaraad Eebe, Dhib (Dambi) korkiinna ma Saarra waxaad isaga raalli Noqoteen Qadarriida ka Dib, Eebana waa Oge Falsan.

أَيُّمَنَّا كُفْرًا كَتَبَ اللَّهُ عَلَيْكُمْ وَأَجَلَ لَكُمْ مَا
وَرَأَى ذَلِكَ أَنَّ تَتَّبَعُوا بِأَمْوَالِكُمْ مُفْضِلِينَ عَيْدٍ
مُسْتَفِجِينَ فَمَا اسْتَمْتَعْتُمْ بِهِ مِنْهُنَّ فَآتُوهُنَّ
أُجُورَهُنَّ فَرِيضَةً وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِي مَا
تَرْضَيْتُمْ بِهِ مِنْ بَعْدِ الْفَرِيضَةِ إِنَّ اللَّهَ كَانَ
عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١١﴾

Aayaddani waxay Caddayn waxa ka Reebban ninka Inuu Guursado oo Haween ah, Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Waxay ku Xarrimantay Todobo Nasab, Todobana Xiidid. Sidoo kale Cidda wax Nuujisa iyo tan kula Nuugta. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgayo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaa ku Reebban Nuugmada waxa ku reeban Nasabka, waase inay ahaato Shan Nuugmo. Sidoo kale waxaa Reebban Haweenay la Qabo, Eebana waa Oge Falsan oo waxa Fiican ku Toosin Dadka. An-Nisaa' (23-24).

25. Ruuxaan Karin oo idinka mid ah Awood uu ku Guursado Haweenka Xorta ah ee rumeysan (Xaqa) ha Guursado waxay hanatay Gacmihiinnu oo ah Gabdhaha Rumeysan (Xaqa) Eebana waa ogyahay Iimaankiinna, Qaarkiin Qaarbuu ka ahaaday, kuna guursada idamka Ehelkooda, u Siiyana Ujuurada (Meherkooda) si Fiican, iya-goo Dhawrsoon oo Xumaan (Zino) ka Dheer, Saaxiibbana yeelanayn, Haddii lagu dhawro (Guur) ooy Xumaan la Yimaadaan korkooda waxaa ah Nus waxa ah kuwa Xorta ah oo Cigaab ah, Arrintaas waa Ruuxii ka Cabsada Zino, oo idinka mid ah, Haddaadse Samirtaan yaa idiin khayr roon, Eebana waa Dambi Dhaafe Naxariista.

وَمَنْ لَمْ يَسْتَطِعْ مِنْكُمْ طَوْلًا أَنْ يَنْكَحَ
الْمُحْصَنَاتِ الْمُؤْمِنَاتِ فَمِنْ مِمَّا مَلَكَتْ
أَيْمَانُكُمْ فَمَنْ فَتَيْتُمْ كُفْرًا الْمُؤْمِنَاتِ وَاللَّهُ أَعْلَمُ
بِأَيْمَانِكُمْ بَعْضُكُمْ مِنْ بَعْضٍ فَأَنْكِحُوهُنَّ
بِإِذْنِ أَهْلِهِنَّ وَءَاتُوهُنَّ أُجُورَهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ
مُحْصَنَاتٍ عَيْرٍ مُسْتَفِجَاتٍ وَلَا مَتَّخِذَاتٍ
أَخْدَانٍ فَإِذَا أَحْصَيْنَ فَإِنْ أَتَيْنَ بِفَاحِشَةٍ فَعَلَيْهِنَّ
نِصْفُ مَا عَلَى الْمُحْصَنَاتِ مِنَ الْعَذَابِ ذَلِكَ لِمَنْ
حَتَّى أَلَمَّتْ مِنْكُمْ وَأَنْ تَصْبِرُوا وَخَيْرٌ
لَكُمْ وَاللَّهُ عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١١﴾

26. Wuxuu Dooni Eebe inuu idiin Caddeeyo Idinkuna Hanuuniyo Wadadii kuwii idinka Horreeyey oo idinka Toobad aqbalo Eebana waa Oge Falsan.

يُرِيدُ اللَّهُ لِيُبَيِّنَ لَكُمْ وَيَهْدِيَكُمْ سَبِيلَ
الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ وَتُوبَ عَلَيْكُمْ وَاللَّهُ
عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿١١﴾

27. Eebe wuxuu dooni inuu idinka

وَاللَّهُ يُرِيدُ أَنْ يَتُوبَ عَلَيْكُمْ وَيُرِيدُ الَّذِينَ

Toobad aqbaloo waxayse dooni kuwii Raacay waxa Naftoodu Jeceshahay inaad iilataan iilasho wayn.

يَتَّبِعُونَ الشَّهَوَاتِ أَنْ تَمِيلُوا مَيْلًا عَظِيمًا ﴿٥٧﴾

28. Wuxuu dooni Eebe inuu idinka Fudeydiyo, waxaase La Abuuray Dadka isagoo tabar Yar.

يُرِيدُ اللَّهُ أَنْ يُخَفِّفَ عَنْكُمْ وِجْلَ الْإِنْسَانِ
صَعِيفًا ﴿٥٨﴾

Waa in Guurku ahaadaa mid laga Fiirsado, oo la guursadaa Haweenka Xorta ah ee Dhawrsoon, haddii Tabar loo waayana la guursado kuwa Dhawrsoon ood hanataan haddaad Xumaan ka yaabtaan, iyagoo la warsan Ehelkooda, Xumaan hadday falaanna waxaa la Ciqaabta Nus Ciqaabta kuwa Xorta ah. Tan kale Eebe Wanaag iyo Hanuun yuu inala Rabaa iyo Fudayd, kuwa Xumaanta iyo waxay Naftoodu Jeceshahay Raacayse waxay idinla Dooni inaad si Weyn u Dhuntaan. Wax badan baa ku soo aroray Tabaryarida Dadka Xagga Cibaadada iyo Xagga Dooniddaba. An-Nisaa' (25-28).

29. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Cunina Xoolihiinna dhexdiinna (Si Baadil ah) (Xaaraam ah) inay Ganacsi Raalli aad isaga tihii tahay mooyee, hana Dilina Naftiinna, Eebe wuxuu idiinyahay Naxariistee.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَاتَأْكُلُوا أَمْوَالَكُمْ
بَيْنَكُمْ بِالْبَاطِلِ إِلَّا أَنْ تَكُونَ تِجَارَةً عَنْ
تَرَاضٍ مِنْكُمْ وَلَا تَقْتُلُوا أَنْفُسَكُمْ إِنَّ اللَّهَ
كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا ﴿٥٩﴾

30. Ciddii u Fasha Arrintaas Colnimo iyo Dulmi Waxaannu galin Doonnaa Naar, Arrintaasna Eebe waa u Fududahay.

وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ عُدْوَانًا وَظُلْمًا فَسَوْفَ نُصَلِّيهُ نَارًا
وَكَانَ ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرًا ﴿٦٠﴾

31. Haddaad ka Dheeraataan Dam-biyada waa weyn waxaan idinka Reebeynno waxaannu ka asturi Xaggiinna Xumaantiinna waxaana idin Galin Meel Fiican (Sharaf leh).

إِنْ تَجِدُوا كُفْرًا بِمَا تُشْهِرُونَ عَنْهُ نُكُفِّرْ
عَنْكُمْ سَيِّئَاتِكُمْ وَنُدْخِلْكُمْ مُدْخِلَ
كَرِيمًا ﴿٦١﴾

32. Ha tamaniyina wuxuu kaga Fadilay Eebe Qaarkiin Qaar, Ragga waxaa u Sugnaaday Qayb waxay kasbadeen, Haweenkana waxaa u Sugnaaday qayb waxay kasbadeen, Waydiista Eebe Fadligiisa, Eebana waxkasta waa Ogyahay.

وَلَا تَتَمَنَّوْا مَا فَضَّلَ اللَّهُ بِهِ بَعْضَكُمْ عَلَى بَعْضٍ
لِلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِمَّا كَسَبُوا وَلِلنِّسَاءِ نَصِيبٌ
مِمَّا كَسَبْنَ وَسَعَى اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ
إِنَّ اللَّهَ كَانَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمًا ﴿٦٢﴾

33. Cid kasta waxaan u Yeellay Kuwo dhaxla waxay ka tageen Labada waalid

وَلِكُلِّ جَعَلْنَا مَوْلَىٰ وَمَاتَرَكَ الْوَالِدَانِ

iyo Qaraabadu iyo kuwaad Guntateen Dhaar (Isdhaarsateen) siiya Qaybtoo-da, (oo Gargaar ah), Eebana wax kasta waa u Marag.

وَالْأَقْرَبُونَ وَالَّذِينَ عَقَدَتْ أَيْمَنُكُمْ
فَأُولَئِكَ نَصِيبُهُمْ إِنْ اللَّهُ كَانَ عَلَى
كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدًا ﴿٢٣﴾

Aayadaha Hore waxay Caddayn Xaaraanimada Xoolaha Dadka oo Xaq darro lagu Cuno Ganacsiga Xalaasha ah ee lagu Heshiyase waa Banaanyahay, Is dilkuna waareebban yahay illeen Mustimintu waa Naf kaliyee, Ciddii Saas fashana waxaa lagu Ciqaabi Naar, haddii Dambiyada Waa Weyn laga dhawrsadana Eebbe wuu Dhaafi Xumaanta kale Jannana wuu galin, Xasadka iyo Niyad Xumiduna waa la reebay, cid walbase waxaa u bannaan Shaqo iyo Kasab xalaala iyo inuu Eebe wax warsado, Cid walbana Mudan waxay Waalidku iyo Qaraabadu ka tagaan, iyadoo wax laga siin Ciddaad is Xidhiidhisaan, Dambiyada waa Weynna waxaa ka mid ah: Gaalnimu, Dil Xaq darro ee Muslim, ka cararka Jahaadka, Caasiga Waalidka, Zino ku sheegga Haweeney Dhawrsoon, Barashada Sixirka, Cunidda Ribada iyo Cunidda Xoolaha Agoonta, Zinada, Dhaarta Beenta ah, iyo Kuwo kale. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Dambiyada waa Weyn Todoba waxay uga Dhawyihiin Todobaatan, An-Nisaa' (29-33).

34. Raggaa u taagan (Maamulka) Haweenka, ka Fadilida Eebe Qaarkood Qaar iyo ku nafaqaynta Xoolahooda darteed, (Haweenka) Wanaagsan way Adeecaan Illaliyaanna Maqnaasho ilaalinta Eebe Darteed, kuwaadse ka Cabsataan Caasinimadooda waaniya, kagana Fogaada Jiifka, garaacana, hadday idin Adeecaanna ha u dalbina Korkooda jid (inaad dhibtaan), Eebana wuxuu ahaaday sarreeye Wayn.

الرِّجَالُ قَوَّامُونَ عَلَى النِّسَاءِ بِمَا فَضَّلَ اللَّهُ
بَعْضَهُمْ عَلَى بَعْضٍ وَبِمَا أَنْفَقُوا مِنْ أَمْوَالِهِمْ
فَالصَّالِحَاتُ قَانِتَاتٌ حَافِظَاتٌ لِّلْغَيْبِ بِمَا
حَفِظَ اللَّهُ وَاللَّتِي تُخْفَىٰ فَتَشُوهُنَّ
فِعْظُوهُنَّ وَأَهْجُرُوهُنَّ فِي الْمَضَاجِعِ
وَأَضْرِبُوهُنَّ فَإِنِ اطَّعْتَهُمْ فَلَا تَبْغُوا عَلَيْهِنَّ
سَبِيلًا إِنْ اللَّهُ كَانَ عَلَيْكُم مِّنْ

35. Haddaad ka Cabsataan Iskhilaafka Dhexdooda u bixiya Xaq soore Ehelkiisa ah iyo Xaq soore Ehelkeeda ah, hadday doonaan Wanaajinna Eebe wuu iswaafajin Dhexdooda, Eebana waa Oge Xeeldheer.

وَلَا تَحْفَرُوا شِقَاقَ بَيْنِهِمَا فَاتَّبِعُوا حُكْمًا مِّنْ
أَهْلِيهِ وَحُكْمًا مِّنْ أَهْلِهَا إِنْ يُرِيدَا إِصْلَاحًا
يُوفِقُ اللَّهُ بَيْنَهُمَا إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلِيمًا
حَكِيمًا ﴿٢٥﴾

36. Caabuda Eebe hana la Wadaajinina waxba, Labada Waalidna u Wanaag fala, iyo Qaraabada, Agoonta, Masaa-kiinta, Dariska dhaw, Dariska Durug-san, Saaxiibka Dhinaca, Socotada iyo waxay hanatay Gacmihiinnu, Eebana ma Jecla Cidda Kibirka badan ee Faanka badan.

﴿ وَأَعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا
وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا وَبِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ
وَالْمَسْكِينِ وَالْحَارِثِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَالْحَارِثِ الْجُنُبِ
وَالصَّاحِبِ بِالْجَنبِ وَابْنِ السَّبِيلِ وَمَا
مَلَكَتْ أَيْمَنُكُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ مَن
كَانَ مُخْتَلًا فَخُورًا ﴿٢٦﴾

Ragga iyo Haweenka Eebaa isu abuuray mid walbana si u abuuray, una yeelay Shaqooyin lagu kala habboonyahay sida uurka, Nuujinta iyo wixii la mid ah, saas darteed mar haddii meel lagu wada noolyahay waa in Ninku ilaalayaa Qoyska oo nafaqeyyaa, oo Hogaamiye u noqdaa, Haweeneyda Fiicanna waa tan Suubban ee Dhawrsoon, hadday Gaftana waa la Waanin, haddii laga Noogana waa laga fogaan Jiifka, lana garaaci, hadday toosnaato wax Jid ah laguma leh, hadduu Khilaafyimaadana waxaa loo bixin Qaraabada labada Dhinac, oo is waafajin Eebana waa in la Caabudo waxna lala wadaajin, loona Samo falo Waalidka, Qaraabada, Agoonta, Masaakiinta, Dariska dhaw, Dariska Durugsan, Saaxiibka Dhabta ah, Socotoda, iyo waxa Gacmahooda ku hoos jira. Kibir iyo Faanna Eebe ma jecla. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Waxaa ku wareega Ehelka Muxamed Haween ka Sheegan Raggooda, Raggaasina ma aha kuwo Fiican (Abuu Daawuud..) balday Aayadahan sida islaamka ugu dadaali Wanaagga, Heshiiska, Naxariista, iyo isdhaqaalaynta iyo is taakulaynta. Saaxiibka U Fiican waan kan u Fiican Saaxiibkii, (Imaam Axmed) Taasina waxay dharbaaxo ku tahay kuwa islaamka iyo Haweenkiisa wax ka sheega een wax kasayn. An-Nisaa' (34-36).

37. Oo ah kuwa Bakhayla Farana Dadka Bakhaylnimo qarinna wuxuu Siiyey Eebe oo Fadli ah, waxaana u darabnay Gaalada cadaab wax dul-leeya.

الَّذِينَ يَبِخُلُونَ وَيَأْمُرُونَ النَّاسَ بِالْبُخْلِ
وَرَكِبُوا مَاءَ آتِهِمْ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ
وَأَعْتَدْنَا لِلْكَافِرِينَ عَذَابًا مُهِينًا ﴿٣٧﴾

38. Iyo kuwa u bixiya Xoolahooda istuska Dadka oon rumeyn Eebe iyo Maalinta Dambe, ruuxii shaydaan u noqdo Saaxiib wuu Xumaaday Saaxiibkiis.

وَالَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ رِيَاءَ النَّاسِ
وَلَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَلَا بِالْيَوْمِ الْآخِرِ وَمَنْ يَكُنِ
الشَّيْطَانُ لَهُ قَرِينًا فَسَاءَ قَرِينًا ﴿٣٨﴾

39. Maxaa (dhiba) oo korkooda ahaaday hadday Rumeeyaan Eebe iyo Maalinta Dambe oy Bixiyaan Qayb wuxuu ku Arzuqay Eebe, Ilaahayna waa Ogyahay iyaga.

وَمَا ذَا عَلَيْهِمْ لَوْ آمَنُوا بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَأَنفَقُوا
مِمَّا رَزَقَهُمُ اللَّهُ وَكَانَ اللَّهُ بِهِمْ عَلِيمًا ﴿٣٩﴾

40. Eebe ma Dulmiyo wax la eg Darro (waxyar) hadday Wanaag tahayna wuu laab laabaa wuuna ka siin Agtiisa Ajir Weyn.

إِنَّ اللَّهَ لَا يَظُنُّهُمْ وَمِثْقَالَ ذَرَّةٍ وَإِنْ تَكَ حَسَنَةً
يُضَاعِفْهَا وَيُؤْتِ مِنْ لَدُنْهُ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٤٠﴾

41. ee Say ahaan Markaan ka keenno ummad kasta marag oon kuu keenno adigana (Nabiga) kuwaas korkooda Marag.

فَكَيْفَ إِذَا جِئْنَا مِنْ كُلِّ أُمَّةٍ بِشَهِيدٍ وَجِئْنَا بِكَ
عَلَى هَؤُلَاءِ شَهِيدًا ﴿٤١﴾

42. Maalintaas waxay jeclaan kuwii Gaaloobay oo Caasiyey Rasulka in lala Simo Dhulka (oo uu liqo) kamana Qariyaan Eebe Hadal.

يَوْمَئِذٍ يَوْمَ الَّذِينَ كَفَرُوا وَعَصَوْا الرَّسُولَ
لَوْ سَأَلْتَهُمْ لَمَنْ الْأَرْضُ وَاللَّيْلُ لَمَنْ لَقَدْ كَذَبُوا
عَلَى اللَّهِ كَذِبًا ﴿٤٢﴾

Bakhaynimadu waa Ceeb waana la Caayey, waxaabase ka sii daran inaad fartid Dadka Bakhaynimo, waana inaad Xaqa wax ku bixin weydo, ama Qariso wax Wanaag ah ee Eebe ku siiyey ama wax u Bixiso istustus aadan dar Eebe u bixinin, kuwaas Shaydaan baa ka Saaxiib yeeshay, Cidduu la Saaxiibana way Khasaartay, waase in la rumeeyo Eebe iyo Qiyaamada waxna la baxsado, illeen Eebe Dadka kama dulmiyo wax yarnee, hadday Wanaag tahayna wuu u Laab laabi oo siin Ajir weyn, Xaalkuse sees noqon marka Ummad walba Marag loo keeno, Nabigana Marag loogu keeno Umaddiisa Maalintaas gaalada Rassulka Caasiday waxay Jeclaan in Dhulku la go'o, Cid wax ka qarin Eebana ma jirto, Waxaa sugnaaday marka Eebe u Nicmeeyo Addoon wuxuu Jecelyahay inay ka muuqato Raadkeedu. Cabdullahi Binu mascuud wuxuu Yidhi: Rasuulkaa i yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) Igu Akhri Quraanka markaasaan idhi ma waxaan kugu akhriyaa Adoo laguu soo dajiyey? markaasuu yidhi: Waxaan Jeclahay inaan cid kale ka maqlo, markaasaan ku akhriyey Suuratu Nisaa intaan ka gaadho: Say ahaan markaan uga keenno ummad kasta Marag.. markaasuu yidhi: waa ku filantahay isagoy Indhihiisu Ilmayn. (Bukhaari). An-Nisaa' (37-42).

43. kuwa (Xaqa) Rumeeyow haw dha-waanina Salaadda idinkoo sakhraansan (aayaddu waxay soo degtay intaan khamriga la Xarrimin) intaad ka gara-taan waxaad dhahaysaan iyo idinkoo Junub ah inaad Jid gudbaysaan mooyee intaad ka maydhataan, haddaad tihiin kuwa Buka ama Safar ah ama uu ka yimid Ruux idin ka mid ah kortag, ama Taabataan haweeney aadanna helayn Biyo ku Gagabaysta Carro Wanaagsan, kuna masaxa (Mariya) Wajiyadiinna iyo Gacmihiinna, Eebana waa Cafiyee Dambi dhaafa.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَقْرَبُوا الصَّلَاةَ وَأَنْتُمْ سُكَرَىٰ حَتَّىٰ تَعْلَمُوا مَا تَقُولُونَ وَلَا جُنُبًا إِلَّا عَابِرِي سَبِيلٍ حَتَّىٰ تَغْتَسِلُوا وَإِنْ كُنْتُمْ مَرْضَىٰ أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ أَوْ جَاءَ أَحَدٌ مِّنْكُم مِّنَ الْغَايِبِ أَوْ لَمْ تُسْمِعُوا النِّسَاءَ فَلَمْ تَجِدُوا مَاءً فَتَيَمَّمُوا صَعِيدًا طَيِّبًا فَامْسَحُوا بِرُءُوسِكُمْ وَأَيْدِيكُمْ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَفُوًّا غَفُورًا ﴿٤٣﴾

44. Ka warran kuwa la siiyey Qayb Kitaabka ah (Tawreed) oo Gadan Baadi doonina inaad ka Dhuntaan Jidka.

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ أُوتُوا نَصِيبًا مِّنَ الْكِتَابِ يُشْرُونَ الصَّلَاةَ وَيُرِيدُونَ أَنْ تَتَّخِذُوا السَّبِيلَ ﴿٤٤﴾

45. Eebaa Og Colkiinna, Alle ayaana Welinnimo idinku filan (oo arrimihiinna ka taliya), wuxuuna ku filanyahay Eebe Gargaare.

وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِأَعْدَائِكُمْ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ وَلِيًّا وَكَفَىٰ بِاللَّهِ نَصِيرًا ﴿٤٥﴾

46. Kuwii Yuhuudoobay waxay ka Leexin Kalimooyinka Meelahooda waxayna dhihi waan Maqallay oon Caa-sinnay, maqal ha maqline, waxayna (dhihi) na ilaali iilid Carrabkooda iyo Durid Diinta (Islaamka) darteed, had-day dhahaan waan maqalnay waana Adeecnay ee maqal na dayna saasaa u

مِنَ الَّذِينَ هَادُوا يُحَرِّفُونَ الْكَلِمَ عَن مَّوَاضِعِهِمْ وَيَقُولُونَ سَمِعْنَا وَعَصَيْنَا وَأَسْمَعُ غَيْرَ مَسْمُوعٍ وَرَدَعْنَا لِيَآئِ أَلْسِنَتِهِمْ وَطَعْنًا فِي الدِّينِ وَلَوْ أَنَّهُمْ قَالُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأَسْمَعُ وَأَنْظُرْنَا لَكَانَ خَيْرًا لَّهُمْ وَأَقْوَمَ وَلَٰكِن لَّمْ يَلْمِزْهُمُ اللَّهُ بِكُفْرِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُونَ

khayr roonaan lahayd una toosnaanlahayd, laakiin waxaa lacnaday Eebe Gaalnimadooda Darteed mana Ru-meeyaan wax yar mooyee.

الْأَقْبِيلَا ﴿٤٦﴾

Ruuxaan kasayn wuxuu ku Hadli ma bannaana inuu Salaadda galo, sidii kuwii Tukanaayey iyagoo wax maskaxda dooriyey Cabba, tan kale Eebe ma Cidhiidhyin Muslimka, oo cidda Junubta, ama Jirran, ama Safar ah, ama Kortaga, ama Haween Taabata oon Biyo helin wuu gagabaysan, Taasoo ah inuu Carrada Wajiga iyo Gacmaha mariyo, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi Dhulka Masjidbaa nalooga dhigay Carradiisana Daahir.

Aayadaha kale waxay ka warrami Yahuud iyo xumaantooda iyo Say Xaqa uga leexdeen, una leexiyeen, haddallo Xun iyo dhibna ay ugu hadlaan, Taasina waa waxa Eebe ku Nacladay uguna Cadhooday, waana Caado ay iska leeyihiin oy iska dhaxleen xaq Diidka iyo Xumaan Jeacaylka. An-Nisaa' (43-46).

47. Kuwa la siiyey Kitaabkow Rumeeya waxaan soo dajinnay isagoo rumeyn waxaad haysataan ka hor intaannan masixin wajiyaal oon u Celinno gadaasheeda ama Nacladno sidaan u Nacladnay Asaxaabtii (Kuwii) Sabtida (Yuhuudda) wixii Alle amar ku bixiyo ahaanshihiisana waa kii ahaada (oo fula).

يَتَّيْمِنُ الَّذِينَ آوُوا إِلَيْنَا مِنَّا مِمَّا كَانُوا مِنَّا يَوْمَ نُنزِّلُ مِنَ السَّمَاءِ مِائِدًا مِّنَ اللَّيْلِ تُطْمَسُ وُجُوهُهَا
فَرَزَقْنَا عَلَىٰ أَدْبَارِهِمْ أَوْ نَلْعَنُهُمْ كَمَا لَعَنَّا أَصْحَابَ
الَّذِينَ كَفَرُوا مِنَّا فِي الْآيَاتِ ﴿٤٧﴾

48. Eebe ma dhaafo in cibaadada lala wadaajiyo, wuxuuse ka dhaafaa waxaa wixii ka soo hadhay Cidduu doono, Ruxii la wadaajiyo Eebe wuxuu beena-buurtay Dambi Weyn.

إِنَّ اللَّهَ لَا يَغْفِرُ لِمَن يَشْرِكْ بِهِ ۚ وَيَغْفِرُ مِمَّا دُونَ ذَلِكَ
لِمَن يَشَاءُ ۚ وَمَن يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَقَدِ افْتَرَىٰ إِثْمًا
عَظِيمًا ﴿٤٨﴾

49. Ka warrama kuwa daahirin (ammaani) Naftooda, Eebaa Daahiriya Cidduu doono lagamana Dulmiyo waa ku dhaggan Jeex Laf Timireed (Wax yar).

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يُزَكُّونَ أَنفُسَهُمْ بَلِ اللَّهُ يُزَكِّي مَن
يَشَاءُ وَلَا يظلمون قَيْلًا ﴿٤٩﴾

50. Day siday ugu Been Abuuran Eebe isagaa ugu filan Dambi Cad.

أَنْظُرْ كَيْفَ يَقْفِرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكُذِبَ ۗ وَكَفَىٰ بِهِ
إِثْمًا مُّبِينًا ﴿٥٠﴾

51. Ka warran kuwa la siiyey qayb Kitaabka ah oo rumeyn Sixir iyo shaydaan, una dhihi kuwa Gaalobay kuwaasaa ka hanuunsan (Toosan) Kuwa Rumeeyey Jidkooda.

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ أُوتُوا نَصِيبًا مِّنَ الْكِتَابِ
يُؤْمِنُونَ بِالْجَنِّ وَالطَّاغُوتِ وَيَقُولُونَ لِلَّذِينَ
كَفَرُوا هَؤُلَاءِ أهدىٰ مِنَ الَّذِينَ ءَامَنُوا سَبِيلًا ﴿٥١﴾

52. Kuwaas waa kuwuu Nacladay Eebe, Cid Eebe Nacladayna uma heshid Gargaare.

أُولَٰئِكَ الَّذِينَ لَعَنَهُمُ اللَّهُ ۖ وَمَن يَلْعَنِ اللَّهُ فَلَن مَّجْدَلَهُ ۗ
نَصِيرًا ﴿٥٢﴾

Waxaase loogu yeedhi Gaalada Ehelu Kitaabka ah inay rumeeyaan Quraanka Rumeeyey Kutubtii hore intaan Eebe Doorinin, ama Nacladin siduu u Nacladay kuwii Sabtida dambaabay ee Yuhuudeed. Eebana waa ka dhaafaa Dadka waxaan Gaalnimo ahayn, hadduu doono, Gaalnimose waa Dambi weyn, mana aha inay is ammaanaan, Eebaa og Cidda ammaan mudane, Been abuurasho, Xumaan iyo Shaydaan la rumeeyo, iyo Sheegasho ka Toosnaanta Muslimiinta waxay Sabab u tahay Naclad, wax u gargaarana ma helaan. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Dulmigu waa Saddex, midkood ma dhaafo Eebe, midna wuu Dhaafaa, midna kama tago, kuusan dhaafayn waa Gaalnimada, kuu dhaafi waa Dambiga kale, kuusan ka tagayna waa is dulminta Dadka qaarkood qaar ilaa la isaga Abaal mariyo. Waxaa wariyey (Bukhaari iyo Muslim). An-Nisaa' (47-52).

53. Mise waxay leeyihiin Qayb Xukunka oo markaas ayan siinayn Dadka Laf Timir Duleelkeed (wax buuxiya).

أَتْرَاهُمْ نَصِيبٌ مِّنَ الْمَالِكِ إِذَا لَمْ يَأْتُواكَ النَّاسُ
تَفِيْرًا ﴿٥٣﴾

54. Mise waxay ku Xasdi Dadka waxa Eebe Siyey oo Fadli ah, waxaan Siinay Ehelkii Ibraahiim Kitaabka iyo Xigmad, waxaana siinay Xukun Wayn.

أَمْ يَحْسُدُونَ النَّاسَ عَلَىٰ مَاءِ أَنَّهُمْ لَللَّهِ مِن فَضْلِهِ
فَقَدْ أَتَيْنَا آلَ إِبْرَاهِيمَ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ
وَأَتَيْنَاهُم مَّلَكًا عَظِيمًا ﴿٥٤﴾

55. Waxaase ka mid noqday mid Rumeeya (Xaqa) waxaana ka mid ah mid ka Jeediya Xaqa, waxaa ugu Filan Jahannamo Gubid.

فَمِنْهُمْ مَّنْ ءَامَنَ بِهِ، وَمِنْهُمْ مَّنْ صَدَعَتْهُ وَكَفَىٰ بِجَهَنَّمَ
سَعِيرًا ﴿٥٥﴾

56. Kuwii ka Gaaloobay Aayaadkana-ga waxaanu Galin Naarta, mar kastoos gubto Haragoodu waxaan ku badalnaa harko kale si ay u Dhadhamiyaan Cadaabka, Eebana waa Adkaade Fal-san.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا رَبَّائِنَا سَوْفَ نُضَلِّيهِمْ أَتَارَا كَمَا
نُضِلَّجَتْ جُلُودُهُمْ بَدَّلْنَاهُمْ جُلُودًا غَيْرَهَا لِيَذُوقُوا
الْعَذَابَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿٥٦﴾

57. Kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican waxaan galinaynaa Jan-nooyin ay Dareeri Dhexdeeda Wa-biyaal, oyna ku waari Dhexdeeda Waligood, waxayna ku mudan Haween la Daahiriyeey waxaana Galinaynaa Hoos Fiican.

وَالَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ سَنُدْخِلُهُمْ جَنَّاتٍ
تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا لَّهُمْ فِيهَا
أَزْوَاجٌ مُّطَهَّرَةٌ وَهُمْ فِيهَا عَلَىٰ ظِلِّيلًا ﴿٥٧﴾

Aayaduhu waxay Caddayn Xasadka Yuhuud iyo inayna u oggolayn Muslimiinta Wanaag iyo Khayr siddii iyagoo Awoodda wax ku leh, Eebe Cidduu Doono yuu siiyaa Kitaab iyo Xigmad iyo Xukun, Ciddii Xaqa rumeysa iyo tii ka Jeedsatana waa uun laga abaalmarin, kuwa Gaaloobana oo Beeniya Aayaadka Eebe waxay Gali Naar Gubi Jidhkooda markastoy gubatana lagu badali mid kale si ay u dhadhamiyaan Cadaabka, kuwa Xaqa Rumeeyayna oo Camal fiican fala waxay Gali Janno oy ku waari oo wanaagsan. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Jannada waxaa ku yaal Geed uu Socon Hooskeeda mid saaran Gaadiid Boqol Sano oosan Goynayn. (waa Saxiix). An-Nisaa' (53-57).

58. Eebe wuxuu idin Fari inaad u Guddaan (siisaan) Amaanada Ehelkeeda, (Ciddeeda) haddaad kala Xukumaysaan Dadkana inaad ku kala Xukuntaan Caddaalad, Eebe waxaa Wanaagsan wuxuu idinku waanin Eebana waa Maqle Arka.

﴿إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَنْ تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَىٰ أَهْلِهَا وَإِذَا حَكَمْتُمْ بَيْنَ النَّاسِ أَنْ تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ إِنَّ اللَّهَ عِظْمًا عَظِيمًا ٥٨﴾

59. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Adeeca Eebe oo Adeeca Rasuulka iyo kuwa Amarka leh, oo idinka mid ah, haddaad ku Dooddaan Arrin u Celiya Eebe iyo Rasuulka haddaad tihiin kuwo Rumeeyey Eebe iyo Maalinta Dambe (Qiyaamada) saasaana khayr roon oo Wanaag badan Xagga Abaalmarinta.

﴿يَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الْأَمْرِ مِنْكُمْ فَإِن تَنَزَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَذُرُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ذَلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ٥٩﴾

60. Ka warran kuwa Sheegan inay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey iyo waxa lagu Dejiyey kuwii kaa horreeyay iyagoo jecel inay u Xukuntamaan Shaydaan, iyagoo la faray inay diidaan, wuxuuna dooni Shaydaanku inuu Baadiyeeyo Baadi Fog.

﴿الَّذِينَ آمَنُوا وَلَمْ يَلْبِسُوا إِيمَانَهُم بِشَيْءٍ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَإِذَا نَزَلَ بِكَ الْكُفْرُ مِنْ دُونِ اللَّهِ لَا يَبْغُونَ مِنَ اللَّهِ شَيْئًا سَاءَ مَا يَحْكُمُونَ ٦٠﴾

61. Marka lagu dhaho u kaalaya waxuu Soo Dejiyey Eebe iyo xagga Rasuulka waxaad Arkaysaa Munaafiqiinta oo kaa Jeedsan jeedsasho.

﴿وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا إِلَىٰ مَا أَنزَلَ اللَّهُ وَإِلَىٰ الرَّسُولِ رَأَيْتُ الْمُتَنَفِقِينَ لَيُضْطَرُّونَ عَنْكَ صُدُوكًا ٦١﴾

Amaanadoo la dhawro loona Celiyo Cideeda iyo Caddaaladda Dadka blagu Maamulo laguna kala Xukumo waa waxyaalaha waawayn oy Diinta Islaamku fari Sidoo kale Eebboo la adeeco iyo Rasuulka iyo kuwa Xaqa wax ku hogaamin oo Culimada iyo Xaakimka Muslimiinta ah, wixii Dood ahna loo celiyo Eebe iyo Rasuulkiisa saasaana Wanaagbadan, kuwa Munaafiqiinta ah oo dooni inay Shaydaan iyo wax leexsan isku xukumaan oo ka baxsan Quraanka iyo Islaamka kuwaas Shaydaan baa Dhumiyeey, marka Quraanka iyo Rasuulka loogu yeedhana way Jeedsadaan. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Adeecidda waa uun waxa fiican. Markalana wuxuu yidhi: Layskuma Adeeco Xumaan. Taasoo ah in khayrka laysku maqlo, waxa Xunse laysku raacin. An-Nisaa' (58-61).

62. Say noqon markay ku Dhacdo Musiibo (dhibaato) waxay hor marsadeen Gacmahoodu Darteed, markaas ay kuu yimaadaan iyagoo ku dhaaran Eebe inaannaan doonin waxaan Wanaag iyo Tawfiq ahayn.

﴿فَكَيْفَ إِذَا أَصَابْتَهُمْ مُصِيبَةٌ يَمَّا قَدَّمْت أَيْدِيهِمْ ثُمَّ جَاءُوكَ يَخْفُونَ يَا اللَّهُ إِنَّ أَرْسَالَنَا إِحْسَانًا وَتَوْفِيقًا ٦٢﴾

63. Kuwaasu waa kuwa uu Ogyahay Eebe waxa Quluubtooda ku Sugan ee ka Jeedso Xaggooda waanina waxaadna u dhahdaa Naftooda Hadal xeel dheer.

أُولَئِكَ الَّذِينَ بَعَدَ اللَّهُ مَا فِي قُلُوبِهِمْ فَأَعْرَضَ عَنْهُمْ وَعَظَّمَهُمْ وَقُلْ لَهُمْ فِي أَنْفُسِهِمْ قَوْلًا بَلِيغًا ﴿١٧﴾

64. Umaanaan dirin Rasuul in la Adeeco mooyee Idanka Eebe, hadday markay Dulmiyaan Naftooda ay kuu yimaadaan oy Dambi dhaaf waydiistaan Eebe una Dambi dhaaf waydiiyo Rasuulku waxay heli Lahaayeen Eebe dambi dhaafe Naxariista.

وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ رَّسُولٍ إِلَّا لِيُطَاعَ بِإِذْنِ اللَّهِ وَلَوْ أَنَّهُمْ إِذْ ظَلَمُوا أَنْفُسَهُمْ جَاءُوكَ فَاسْتَغْفَرُوا اللَّهَ وَأَسْتَغْفَرَ لَهُمُ الرَّسُولُ لَوَجَدُوا اللَّهَ تَوَّابًا رَحِيمًا ﴿١٨﴾

65. Eebahaa baan ku dhaartaye ma rumeeyaan intay kaaga Xukuntamaan waxa dhex mara oyna ka helin Naftooda dhib waxaad Xukuntay, ooy hogaansamaan hogaansan.

فَلَا وَرَيْكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُخْضَعُوا لَكَ فِي سَجَدٍ بِنُهُمْ شِرَّةً لَا يُجِدُوا فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا مِمَّا قَضَيْتَ وَيَسْأَلُوكَ تَسْلِيمًا ﴿١٩﴾

Waxaa ka mid ahayd Caadada Munaafiqiinta inay dhib iyo Xumaan ula Joogaan Nabiga iyo Mu'miniinta, markay Musiibo ku dhacdana ay Nabiga u yimayaan iyagoo ku dhaaran Eebe inayan waxaan Wanaag ahayn rabin, Eebena waa Ogyahay waxa Quluubtooda ku Sugan ee waa in la waaniyo oo laga Jeedsado.

Nabiyadana waxaa loo diray in lagu Adeeco idanka Eebe, Hadayse Toobad keenaan oo Xaqa u noqdaan Eebe waa u Dhaafi lahaa. Xaqana ma rumeeyaan intay uga hogaansamaan Xukunka Rasuulka wax dhib ahna ayna ka helin (63-65).

66. Haddaan ku Faral yeello korkooda Dila Naftiinna ama ka baxa Guryihiinna ma Faleen wax yar oo ka mid ah mooyee, hadday Falaan waxa lagu waanin yaa u Khayr roon, kuna daran (adag) sugnaan (Rumeyn).

وَلَوْ أَنَّا كَتَبْنَا عَلَيْهِمْ أَنْ اقْتُلُوا أَنْفُسَكُمْ أَوْ اخْرَجُوا مِنْ دِيَارِكُمْ مَا فَاعَلُوهُ إِلَّا قَلِيلٌ مِنْهُمْ وَلَوْ أَنَّهُمْ فَعَلُوا مَا يُوعَظُونَ بِهِ لَكَانَ خَيْرًا لَهُمْ وَأَشَدَّ تَثْبِيثًا ﴿٢٠﴾

67. Markaasaan ka siin lahayn Agtana-da Ajir wayn.

وَإِذَا لَأْتَيْتَهُمْ مِنْ لَدُنَّا أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٢١﴾

68. waxaana ku hanuunin lahayn Jid Toosan.

وَلَهَدَيْنَاهُمْ صِرَاطًا مُسْتَقِيمًا ﴿٢٢﴾

69. Ciddii Adeecdaa Eebe iyo Rasuulka kuwaasu waxay ahaan lajirka kuwuu u nicmeeyey Eebe, oo ah Nabiyada, Rumeeyayaasha, Shuhadada iyo kuwa Suubban, waxaana u fiican rafiiq kuwaas.

وَمَنْ يُطِيعِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَأُولَئِكَ مَعَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مِنَ النَّبِيِّينَ وَالصَّادِقِينَ وَالشَّاهِدَاءِ وَالصَّالِحِينَ وَحَسُنَ أُولَئِكَ رَفِيقًا ﴿٢٣﴾

70. Arrintaasuna waa Fadliga Eebe waxaana Ogaansho ku Filan Eebe.

ذَلِكَ الْفَضْلُ مِنَ اللَّهِ وَكَفَى بِاللَّهِ عَلِيمًا ﴿٧٠﴾

Wuxuu ka Warrami Eebe in haddii Dadka Badankiis la fari lahaa inay Falaan waxay sameyn oo Xumaan ah ma ayay yeeleen, wax yar mooyee, maxaa yeelay naftooda ayaa caadeysatay amar diiddada waxaase fiican inay maqlaan waxa lagu waanin, markaasuu Eebe siin lahaa Ajir wayn, Toosina lahaa. Ciddii Eebe Adeecda iyo Rasuulka wuxuu Jannada la gali kuwa Eebe U nicmeeyey oo ah Nabiyade, Rumeeyayaasha, Shuhadada iyo kuwa Suuban, waana Wehelka u fiican, arrintaasuna waa Fadliga Eebe isagaana ku filan Ogaade.

Rabico Binu Kacab waxaa laga wariyey inuu Nabiga (Naxarris iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku yidhi: wax warso, markaasuu yidhi waxaan rabaa inaan kugula Rafiiqo Jannada, markaasuu yidhi waxaas waxaan ahaynna' wuxuuna yidhi waa intaas, markaasuu yidhi (iigu kaalmee Naftaada Badanta Sujuudda. Waxaa wariyey (Muslim).

Taasina waxay ku tusin inay lagama maarmaan tahay in la Camal Fallo, laguna Dadaalo Khayrka iyo Wanaagga si loo Haleelo kuwa Fiican. An-Nisaa' (66-70).

71. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Qaata Digtoonidiinna Duulana idinkoo Koox Koox ah, ama Duula Dhamaan.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اخذُوا حِذْرَكُمْ فَانفِرُوا تَبَاتٍ أَوْ انفِرُوا جَمِيعًا ﴿٧١﴾

72. Waxaa idinka mid ah (Munaafiqiin) Cabsiin (dib marin) hadday idinku dhacdo Musiibo (dhibaato) wuxuu dha-haa waxaa ii Nicmeeyey Eebe korkayga maadaama aanan la joogin.

وَإِنْ مِنْكُمْ لَمَنْ لَيَبْطِئَنَّ فَإِنْ أَصَابَكُمْ مُصِيبَةٌ قَالُوا قَدْ أَتَعَهُ اللَّهُ عَلَىٰ إِذْ لَمْ أَكُنْ مَعَهُمْ سَهِيمًا ﴿٧٢﴾

73. Hadduu idin soo gaadho (Heshaan) Fadli Eebe (Khayr) wuxuu dhihi sidii isagoo ayna ahayn dhexdiinna Jecyl Shallaaytee maxaan ula Joogi waayay, oo Liibaano Liibaan wayne.

وَلَيْنَ أَصَابَكُمْ فَضْلٌ مِنَ اللَّهِ لَيَقُولُنَّ كَأَنْ لَمْ تَكُنْ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُ رَمُودَةٌ يَلَيَسْتَنِي كُنْتُ مَعَهُمْ فَأَفُورًا قُورًا عَظِيمًا ﴿٧٣﴾

74. Ha ku dagaallameen - Jidka Alle-kuwa ku gaday Nolosha dhaw Aakhiro (doortay aakhiro) Ruuxii ku dagaalama Jidka Eebe oo la Dilo ama Adkaada waxaan Siinaynaa Ajir wayn.

* فَلْيَقْتُلْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ الَّذِينَ يَشْرُونَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا بِالْآخِرَةِ وَمَنْ يُقْتَلْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ يَفْتَقِلْ أَوْ تَغْلِبْ فَسَوْفَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٧٤﴾

Jahaadku iyo meel marinta Xaqa iyo Difaaca Diinta iyo Dalka Islaamka waa Waajib Sugaan, iyadoo laga wada qayb qaadan, waxaase Jira kuwo Munaafiqiin ah oo Dadka cabsi galin, marka dhib dhacana yidhaahda Eebaan i raacinnin, marka Guul la helana yidhaahda maxaan ula joogi waayay.

Waxayna ku tusin Aayaddu Wanaagga Eebe u darbay Cidda lagu Dilo Jahaadka ama Adkaata, taasoo ku tusin inaan laga adkaanayn Musliiminta markay kulmistaan iimaan dhab ah, isku Duubni iyo u diyaargarow, hase yeeshee markay Xaqa ka leexdaan oo kala tagaan sida muuqata ayaamahaan waxaa ku Dhiirran Cadawgoda oo ka Adkaan, waase inay is gaadhaan intay Goori Goortahay. An-Nisaa' (71-74).

75. Maxaad ugu dagaallami weydeen jidka Alle iyo in La soo furto kuwa la

وَمَا لَكُمْ أَلَّا تُقَاتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَالْمُسْتَضْعَفِينَ مِنَ

daciifsan (tabarta yar), oo rag, haween, iyo carruurba leh, kuwaasoo oranaya: Allow naga bixi magaaladan dadkeedu ay daalimiinta yihiin, agtaadana nooga yeel Wali (taladeenna qabta oo dhibka gaalada nooga fillaada) iyo mid nooga hiilliya (Kuwan daalimiinta ah).

الرِّجَالِ وَالنِّسَاءِ وَالْوَالِدِينَ الَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا أَخْرِجْنَا مِنْ هَذِهِ الْقَرْيَةِ الظَّالِمِ أَعْمَالُهَا وَاجْعَلْ لَنَا مِنْ لَدُنْكَ وَلِيًّا
وَاجْعَلْ لَنَا مِنْ لَدُنْكَ نَصِيرًا ﴿٧٥﴾

76. kuwa (Xaqa) rumceeyey waxay ku Dagaallami Jidka Eebe, kuwa Gaaloo-bayna waxay ku Dagaallami Jidka Shaydaanka, ee la dagaallama Sokeeyaha Shaydaanka, dhagarta Shaydaanku waa tabar yartahaye.

الَّذِينَ آمَنُوا وَقَاتَلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَالَّذِينَ كَفَرُوا يَقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ الظَّالِمِينَ أُولَئِكَ الشَّيْطَانُ إِنَّ كَيْدَ الشَّيْطَانِ كَانَ ضَعِيفًا ﴿٧٦﴾

77. Ka warran kuwa loo yidhi Reeba Gacmihiinna (Billoowgii Islaamka) Oogana Salaadda, Bixiyana Zakada, markii lagu Faral yeelay Dagaalkana waxaa soo baxay Koox ka mid ah oo uga Cabsan Dadka Cabsida Eebe oo kale ama ka daran, waxayna dhaheen Eebow maxaad noogu Faral yeeshay Dagaalka, maxaad Dhib noogu dhigi wayday Tan iyo Muddo dhaw, waxaad dhahdaa Raaxada Adduunyo waa yartahay, Aakhiraana u khayroon Ciddii Dhawrsan Laydinkama dulmiyo Fatiil (waxa ku dheggaan jeex laftimired) oo kale (wax yar).

الرِّبَا إِلَى الَّذِينَ قِيلَ لَهُمْ كُفُّوا أَيْدِيَكُمْ وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ فَلَمَّا كَتَبَ عَلَيْهِمُ الْقِتَالَ إِذْ آفَرِقُوا مِنْهُمْ يَخْشَوْنَ النَّاسَ كَخَشْيَةِ اللَّهِ أَوْ أَشَدَّ خَشْيَةً وَقَالُوا رَبَّنَا لِمَ كَتَبْتَ عَلَيْنَا الْقِتَالَ لَوْلَا أَخَّرْتَنَا إِلَىٰ أَجَلٍ قَرِيبٍ قُلْ مَتَّعَ الدُّنْيَا قَلِيلًا وَالْآخِرَةُ خَيْرٌ لِمَنِ اتَّقَىٰ وَلَا يُظْلَمُونَ فَتِيلًا ﴿٧٧﴾

Aayaduhu waxay ku Boorin Musliiminta inay Jahaadaan oo Dagaallamaan mar hadday Musliimiin Rag, Haween iyo Carruurba leh oo tabar yar jiraan lana Dullaysan, Dagaalkana waa mid Xaq ah oo Dar Eebe ah iyo mid Xaq darro oo Jid Shaydaan ah, waana in lala Dagaallamo Gargaaraha Shaydaanka, waana tabar yar yahay, mana aha in lagu Dagdago Dagaalka ee waa in Cibaadada la Badiyo lana Adkaysto Jahaadka, Cabsida Dhabta ahna laga Cabsadaa Eebe, lana ogaado inay noloshu Adduun tahay wax yar oo Tagi.

Xasan Basri wuxuu yidhi: Eebe ha u Naxariisto Addoon kula Noolaaday Adduunyada Qadarkeeda, Adduunyana ma aha Bilowgeed iyo Dhammaadkeed waxaan ahayn Ruux Seexday oo ku arkay Hurdada wuxuu Jecelyahay soona Baraarugay. An-Nisaa' (75-77).

78. Meeshaad ahaataanba wuu idin haleeli Mawdku (Geeridu) aad ahaateenba Daaro Dheer dheer oo la adkeeyey dhexdeeda, hadday taabato

إِنَّمَا تَكُونُوا بُدْرِكِ كَرِّ الْمَوْتِ وَلَوْ كُنْتُمْ فِي بُرُوجٍ مُّشِيدَةٍ وَإِنْ نَصِبْتُمْ حَسَنَةً يَقُولُوا هَذَا مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَإِنْ نَصِبْتُمْ سَيِّئَةً يَقُولُوا هَذَا مِنْ عِنْدِكَ قُلْ

wanaag waxay dhahaan tani waxay ka timid Xaga Eebe, hadday ku dhacdo Xumaanna waxay dhahaan tani waxay ka timid Agtaada (Nabiga) waxaad dhahdaa Dhammaan waxay ka ahaadeen Eebe Agtiisa, maxaa u sugnaaday Qoomkaas uma dhawa inay Fahmaan Hadale.

كُلٌّ مِّنْ عِنْدِ اللَّهِ فَهَالِكٌ هَؤُلَاءِ الْقَوْمُ لَا يَكَادُونَ يَفْقَهُونَ
حَدِيثًا ٧٨

79. Wixii ku soo gaadha oo Wanaaga waxay ka ahaadeen Eebe, wixii kugu dhaca oo Xumaan ahna waxay ka ahaatay Naftaada, waana kuu Dirray Dadka adoo Rasuul ah, wuuna ku Filanyahay Eebe Marag.

مَا أَصَابَكَ مِنْ حَسَنَةٍ فَمِنَ اللَّهِ وَمَا أَصَابَكَ مِنْ سَيِّئَةٍ فَمِنَ نَفْسِكَ وَأَرْسَلْنَاكَ لِلنَّاسِ رَسُولًا وَكَفَى بِاللَّهِ شَهِيدًا ٧٩

80. Ruuxii adeeca Rasuulka wuxuu Dhab u Adeecay Eebe, Ruuxii Jeedsadana kuugu maanaan dirin Ilaaliye.

مَنْ يُطِيعِ الرَّسُولَ فَقَدْ أَطَاعَ اللَّهَ وَمَنْ تَوَلَّى فَمَا أَرْسَلْنَاكَ عَلَيْهِمْ حَفِيظًا ٨٠

81. Waxay dhihi (Munaafiqiintu) Daacad (baan nahay) markay ka tagaan Agtaadana waxay maamulaan (Habeenkii) Koox ka mid ahi waxay ku hadlayaan waxaan ahayn, Eebana wuu Qori waxay Maamuli (miri) ee Ka jeedso Xaggooda talana saaro Eebe, waxaana ku filan Wakiil Eebe.

وَيَقُولُونَ طَاعَةٌ فَإِذَا بَرَأْنَاهُمْ مِنْ بَيْتِ طَائِفَةٍ مِنْهُمْ غَيْرَ الَّذِي تَقُولُ وَاللَّهُ يَكْتُبُ مَا يُبَيِّنُونَ فَأَعْرَضَ عَنْهُمْ فَمَوْلَى لَهُمْ وَاللَّهُ وَكَفَى بِاللَّهِ وَكِيلًا ٨١

Meel kastoo la joogo waa la dhiman si kasta ha laysu Ilaaliyo ama Guryo adag ha la galee, wax kastana waxay ku hoos jiraan Awoodda Eebe ee ma aha in Gaaladu Xumaanta iyo Musiibada u tiiriyaan Nabiga, waxaase jirta in Dadka laga Abaal mariyo waxay kasbadeen khayr iyo Sharba. Rasuulkana wuxuu Eebe u diray Dadka, Eebbaase Wakiil ilaaliye ah ugu Filan Dadka. Ruuxii Adeeca oo Raaca Rasuulka wuxuu adeecay Eebe, Ruuxii Jeedsadase waxba Nabiga kama saarra, waana Munaafaqnimo in la muujisto Xaqrumayn, markii la fogaadana la diido Xaqa oo wax kale la falo, Eebbaase arka kuwaas oo Abaal marin. An-Nisaa' (78-81).

82. Miyeyna Fiirfiirinayn Quraanka, hadduu ka yimid Eebe Agtiisa Meelaan ahayn waxay ka heli lahaayeen dhexdii-sa is khilaaf badan.

أَفَلَا يَتَذَكَّرُونَ الْفُرْقَانُ أَمْ لَوْ كَانُوا مِن عِنْدِ غَيْرِ اللَّهِ لَوَجَدُوا فِيهِ اخْتِلَافًا كَثِيرًا ٨٢

83. markuu u yimaaddo amar Nabad-galya ah ama Cabsi way Faafiyaan, hadday u Celiyaan Xagga Rasuulka ama kuwa cilmiga Leh oo ka mid ah

وَإِذَا جَاءَهُمْ أَمْرٌ مِّنَ الْأَمْنِ أَوْ أَلْحَافٍ إِذَا عَا يُؤْمِنُونَ وَتَوَدَّدُوا إِلَى الرَّسُولِ وَالَّذِي أُولَى الْأَمْرِ مِنْهُمْ لَعَلَّهُمْ

waxaa ogaan lahaa kuwa la soo baxa (Dhabta) oo ka mid ah ayaga, hadduusan jirin Fadliga Eebee korkiinna iyo Naxariistiisa waad raaci lahaydeen Shaydaan wax yar mooyee.

84. Ee ku Dagaallan Jidka Eebe lama mashaqayn Naftaada mooyee, kuna boorri Mu'miniinta (Dagaalka) wuxuu u dhawyahay Eebe inuu idinka reebo dhibka kuwa Gaaloobay, Eebaana daran dhibid, daranna Xanuujin.

85. Ruuxii ergeeya ergeyn Wanaagsan waxaa u ahaada Qayb ka mid ah, Ruuxiise ergeeya ergeyn Xun waxaa u ahaan Dambi ka mid ah, Eebaana wax kasta Ilaaliya.

Wuxuu farayya Eebe in Quraanka si Fiican loo Fiiriyo, lana kaso Macnihiisa, illeen Xagga Eebuu ka ahaadaye, wax is burin ahna kuma jirto sida hadallada kale, markay arrin muhiim ah soo dariistana waxaa Eebe faray in loo celiyo Rassulka iyo kuwa u cilmi Leh, Shaydaanna laga Digtoonaado, Jidka Eebana lagu Jahaado, Cidwalbana waxay la kulmi Shafeecadeeda abaalkeedii Samaan iyo Xumaanba. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaa uun halalagay ummadihiid in ka horreeyay isku Khilaaftii Kitaabkoodii. Mar kalana wuxuu yidhi: Waxaa ugu filan Ruux Been inuu ka sheekeeyo wuxuu Maqlay oo Dhan. An-Nisaa' (82-85).

86. Haddii laydin Salaamo Salaan ku Salaama mid ka Fiican ama ku celiya (mid la mid ah) Eebana waa wax kasta Xisaabiye (Kaafiye).

87. Alle, macbuud xaq lugu caabudo ma jiro isaga mooyee. wuuna idiin soo kulmin Maalinta Qiyaame, shaki ma leh, yaa ka run badan Eebe Hadal (ma jiro).

88. Maxaad leedihiin (Mu'miniinta) ood Munaafiqiinta laba Kooxood ugu Noqoteen (in la laayo iyo in kale) Eebe wuu Halaagay (oo u celiyey gaalnimu) waxay kasbadeen dartiis, ma waxaad doonaysaan inaad Hanuunisaan Cidduu dhumiyey Eebe, Ruuxuu dhumiyey Eebana uma heshid Waddo (Hanuun).

89. Waxay jecelyihiin (Munaafiqiintu)

الَّذِينَ يَسْتَنْبِطُونَهُ مِنْهُمْ وَلَوْ لَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُ لَاتَّبَعْتُمُ الشَّيْطَانَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٨٣﴾

فَقِيلَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ لَا تُكَلِّفُوا الْإِنْسَانَ حَرِيضَ الْمُؤْمِنِينَ عَسَى اللَّهُ أَنْ يَكْفَى بِأَسْ أَلَّذِينَ كَفَرُوا وَاللَّهُ أَشَدُّ بِأَسًا وَأَشَدُّ تَنكِيلًا ﴿٨٤﴾

مَنْ يَسْفَعْ شَفْعَةً حَسَنَةً يَكُنْ لَهُ نَصِيبٌ مِنْهَا وَمَنْ يَسْفَعْ شَفْعَةً سَيِّئَةً يَكُنْ لَهُ كِهْلٌ مِنْهَا وَكَانَ اللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ مُقِيمًا ﴿٨٥﴾

وَإِذْ أَحْبَبْتُمْ بَعْضَهُمْ فَبِحُوبٍ بَأَحْسَنٍ مِنْهَا أُوْرُدُوهَا إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ حَسِيبًا ﴿٨٦﴾

اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ لِيَجْمَعَ كَوْمًا إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ لِأَرْبَابٍ فِيهِ وَمَنْ أَصْدَقُ مِنَ اللَّهِ حَدِيثًا ﴿٨٧﴾

﴿فَمَا لَكُمْ فِي الْمُنَافِقِينَ فِتْنَةً وَاللَّهُ أَرَادَهُمْ بِمَا كَسَبُوا أَلَّا يَدْرُونَ أَن تَهْدُوا مِنْ أَصْلِ اللَّهِ وَمَنْ يُضِلِلِ اللَّهُ فَلَنْ تَجِدَ لَهُ سَبِيلًا ﴿٨٨﴾﴾

وَدُّوا أَنْ يُكْفَرُوا لَكِنَّا كَفَرُوا فَتَكُونُونَ سَوَاءً فَلَا

inaad Gaaloowdaan siday u Gaaloo-been ood isku mid noqotaan, ha ka yeelanina Xaggooda Sokeeye intay uga hijroodaan Jidka Eebe, haddayse Jeed-sadaan qabta oo ku dila meeshaad ka heshaanba, hana ka yeelanina Xaggooda Sokeeye iyo Gargaare (Midna).

90. Kuwa Gaadhi Qoom dhexdiinna iyo dhexdooda ballan (heshiis) yahay mooyee, ama idiin yimid iyadoo ay ka Cidhiidhyantahay Laabtoodu inay idin-la Dagaallamaan ama la dagaallamaan Qoomkooda, hadduu doono Eebe wuu idinku diri lahaa wayna idin la daggal-lami lahaayeen, haddayse idinka dheeraadaan oyan idin la Dagaallamin oy idiin soo hormariyaan Nabadgalyo idiin ma yeelin Eebe korkooda Jid (Xaq kuma lihidiin Dagaalkooda).

Salaantu waa Calaamadda Muslimiinta, Ruuxii ku Salaamana waa inaad u Celisaa mid ka Fiican ama la mid ah. Qiyaamana waa la kulmi, Eebana waa run badane, mana aha in Gaalada lala kala safto ama laysku Khilaafa Xaalkooda, iyaguba waxay jecelyihiin in Muslimiintu Gaalowdo siday iyagu u Gaaloobeen, hana ka yeelanina Sokeeye iyo Gargaare midna, kuwiise la nool kuwo aad ballan leedhihin ama idinla dagaalamin Nabad galiya, Ciddii idin Nabad galisa Nabad galiya, tii idinla Col ahna la dagaallama, waana taas Caddaaladda iyo Wanaagga Islaamku, Dagaallan ma Jecla. An-Nisaa' (86-90).

91. Waxaad helaysaan kuwa kale oo dooni inay idinka nabad galaan, oo ka nabad galaan Qoomkooda (daahirka) markastoo loo celiyo Gaalnimana waa lagu dedejiyaa dhexdiisa, haddayna idinka dheeraan ooyan idin siinin Nabadgalyo ooyan idinka reebin Gacmahooda qabta oo ku Dila meeshaad ka heshaanba, kuwaasna waxaan idiin siinnay Xujo Cad (layntooda).

92. uma habboona (bannaana) Ruux Mu'min ah inuu Dilo Mu'min si gaf ah mooyee, Ruuxii u Dila Mu'min Gaf waxaa saran Xorayn qoor Mu'min, iyo Mag la siiyo Ehelkiisii, inay Sadaqays-taan moyee, hadduu ka midyahay

تَتَّخِذُوا مِنْهُمْ أَوْلِيَاءَ حَتَّىٰ يَهَاجِرُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَإِن تَوَلَّوْا فَخُذُوهُمْ وَأَقْلُوهُمْ حَيْثُ وَجَدْتُمُوهُمْ وَلَا تَتَّخِذُوا مِنْهُمْ وِثْيًا وَلَا نَصِيرًا ﴿٨٦﴾

إِلَّا الَّذِينَ يَصِلُونَ إِلَىٰ قَوْمٍ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُمْ مَبْرَأَةٌ مِّنْهُمْ وَكُنْتُمْ لَهُمْ مَقَرًا أَوْ يَفْتَرُونَ أَوْ يُقَاتِلُونَ أَوْ يَنْتَهِئُونَ عَنْكُمْ وَاللَّهُ سَاطِعُهَا عَلَيْكُمْ فَلَقَاتِلُوهُمْ إِنِ اعْتَزَلُوكُمْ فَلَا يُقَاتِلُوكُمْ وَالْقَوَّامُونَ إِلَيْكُمْ أَلَسَاءَ مَا جَعَلَ اللَّهُ لِكُلِّ شَيْءٍ سَبِيلًا ﴿٨٧﴾

سَتَجِدُونَ الْعَرَبِينَ بِرُيُودِهِمْ أَن يَأْمُرُوكُمْ وَيَأْمُرُوا قَوْمَهُمْ كُلًّا مَا دَرُّوا إِلَىٰ الْفِتْنَةِ أُرْكَسُوا بِهَا فَإِن تَرِيَهُم مِّنْكُمْ وَيُغْلِبُوا إِلَىٰكُمْ أَلَسَاءَ مَا كَفَرُوا أَيْدِيَهُمْ فَخُذُوهُمْ وَأَقْلُوهُمْ حَيْثُ تَقِفْتُمُوهُمْ وَأُولَئِكَ جَعَلْنَا لِكُلِّ عَشَائِرٍ لَّهُمْ سَبِيلًا ﴿٨٨﴾

وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ أَن يَقْتُلَ مُؤْمِنًا إِلَّا خَطَاً وَمَن قَتَلَ مُؤْمِنًا خَطَاً فَتَحْرِيرُ رَقَبَةٍ مُّؤَسَّسَةٌ وَدِيَةٌ مُّسَلَّمَةٌ إِلَىٰ أَهْلِهِ إِلَّا أَن يَصَدَّقُوا فَإِن كَانِ مِن قَوْمٍ عَدُوًّا لَّكُمْ وَهُوَ مُؤْمِنٌ

Qoom aad Coltihiin isna Mu'min yahay waxaa Saaran Xorayn Qoor Mu'min, hadduu ka midyahay Qoom ballan idin dhexyaal waxaa saran mag la siiyo Ehelkiisii iyo Xorayn Qoor Mu'min ah, hadduusan helin (Qoorna) wuxuu Soomi Laba Bilood oo Israac raacsan, waana Toobad Eebe, Eebana waa Oge Falsan.

فَتَحْرِيرُ رَقَبَةٍ مُؤْمِنَةً وَإِنْ كَانَ مِنْ قَوْمِ
بَيْنِكُمْ وَبَيْنَهُمْ بَيْتٌ قَدِيمٌ مُسَلَّمَةٌ إِلَى
أَهْلِهَا وَتَحْرِيرُ رَقَبَةٍ مُؤْمِنَةٍ فَمَنْ لَمْ يَجِدْ
فَصِيَامُ شَهْرَيْنِ مُتَتَابِعَيْنِ تَوْبَةً مِنَ
اللَّهِ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٩٣﴾

93. Ruuxii u Dila Mu'min si Kas ah, Abaalkiisu waa Jahannamo oos ku Waari dhexdeeda, wuuna u Cadhoon Eebe wuuna Lacnadi wuxuu u diyaa-riyay Cadaab wayn.

وَمَنْ يَقْسُطْ مُؤْمِنًا مُتَعَمِدًا فِجْرًاؤُهُ
جَهَنَّمَ خَالِدًا فِيهَا وَعَضِبَ اللَّهُ عَلَيْهِ
وَلَعَنَهُ وَأَعَدَّ لَهُ عَذَابًا عَظِيمًا ﴿٩٣﴾

Waxaa jirta Munaafiqiin ku Gabban Islaamka Jecelse Gaalnimada kuwaas haddayna Nabadgalinin Muslimiinta waa in layska celiyo.

Aayadaha kale waxay ka warrami inayan Banaanayn in Naf Mu'min loo Dilo Xaq darro, Ciddiise si gaf ah u disha waxaa saaran Xorayn Qoor iyo Mag la siiyo Ehelkiisa, haddii la waayana Soon laba Bilood oo is raac raacsan, waa Toobad Fiican, Ciddiise ukas u disha si Xaq darro ah Ruux Mu'min ah Abaalkiisu waa Jahannamos ku waaro, Cadho iyo Lacnad Eebe iyo Cadaab wayn, maxaa yeelay ma fududa Nafta muslimku ee waa Qaali mana banana in lagu xad gudbo. Waxaa sugnaatay: Adduunkoo taga (Rogmada) yaa ka sahlan Eebe agtiisa Dil ruux Muslim ah, mar kalana wuxuu yihi Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): hadday u kulmaan waxa Samaawaadka iyo Dhulka ku Sugaan inay Dilaan Muslim wuxuu Eebe ku tuuri lahaa Naarta, taasina waxay ku tusin sida Islaamku u dhawray Xuquuqda Dadka iyo Noloshiisa, iyo qaalnimada iyo Sharafta Muslimka mar hadduu ka wayn yahay Adduunka oo dhan iyo waxa ku Sugaan. An-Nisaa' (91-93).

94. Kuwa xaqa Rumeeyow markaad u Safartaan Jidka Eebe wax caddaysta (Hubsada) hana dhihina Ruux Salaan idiin soo gudbiyey ma tihid Mu'min idinkoo dooni Dhalanteedka Nolosha dhaw, Eebe agtiisa yey tahay qanii-mooyin Badan, saasaad ahaydeen hor-ray, waxaana idinku galladaystay Eebe, ee caddaysta (Hubsada), eebana wa-xaad Camal falaysaan waa Ogyahay.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذَا صُرِفَتْ فِي سَبِيلِ
اللَّهِ فَتَجِدْنَ أُولَئِكَ قَوْلًا لِمَنْ أَلْفَنَّ إِلَيْكُمْ
السَّلَامَةَ لَسْتُمْ مُؤْمِنًا تَبْتَغُونَ عَرَضَ
الْحَيَاةِ الدُّنْيَا فَوَيْدَ اللَّهِ مَعَارِفُ كَثِيرَةٌ
كَذَلِكَ كُنْتُمْ مِنْ قَبْلُ فَمَنْ اللَّهُ
عَلَيْكُمْ فَتَبْتَغُوا وَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِمَا
تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿٩٤﴾

95. Ma Sinna kuwa Fadhiya ee Mu'mi-niinta ah oon kuwa dhibban ahayn iyo kuwa kula Jahaadi Jidka Eebe Xoolahooda iyo naftooda, wuu ka Fadilay

لَا يَسْتَوِي الْقَاعِدُونَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ غَيْرُ أُولِي الضَّرَرِ
وَالْمُجَاهِدُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ فَضَّلَ

Eebe kuwa ku Jahaaday Xoolahooda iyo naftooda kuwa fadhiya Darajo, dhammaanna: wuxuu u Yaboohay Wanaag, wuuna kaga fadilay Eebe kuwa Jahaaday kuwa Fadhiya Ajir wayn.

اللَّهُ الْمُجَاهِدِينَ بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ عَلَى الْقَتِيلِينَ دَرَجَةً
وَكُلًّا وَعَدَّ اللَّهُ الْحَسَنَىٰ وَقَصَلَ اللَّهُ الْمُجَاهِدِينَ عَلَى
الْقَتِيلِينَ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٩٥﴾

96. Waa Darajooyin Xaggiisa ah iyo Dambidhaaf iyo Naxariis, Eebana waa Dambi Dhaafe Naxariista.

دَرَجَاتٍ مِنْهُ وَمَغْفِرَةً وَرَحْمَةً وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا
رَحِيمًا ﴿٩٦﴾

Aayadahanna waxay caddayn inaan lagu dag dagin Dilka Dadka hadday Islaanimo muujiyaan iyadoo la dooni in Xaqooda la bannaysto, illeen Cid walba marbay dhunsanayd Eebaana hanuuniyee, iyo inayna ekeyn Mu'miniinta cudur la'aan ka fadhiista Jahaadka iyo kuwa ku Jahaada Xoolahooda iyo Naftooda Jidka Eebe, wuxuu Eebe ka fadilay kuwa ku Jahaada Jidka Eebe kuwa ka Fadhiista, in kasta oo Mu'min dhamaantiis Eebe Wanaag u diyaariyay, hadana wuxuu Eebe siin kuwa Jidkiisa ku Jahaada Darajooyin waawayn, Dambi dhaaf iyo Naxariis. Waxayna ku tusin Aayaduhu in wax la hubsado een lagu dag dagin cidaan la hubin Gaalnimadiisa, iyo in Jidka Eebe ku Jahaadkiisu leeyahay Fadli iyo Ajir wayn. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgayo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Janada waxaa ah Boqol Darajo oo Eebe u diyaariyay kuwa ku jahaada Jidkiisa, Labadii Darajana waxaa u dhaxaysa inta u dhaxaysa Cirka iyo Dhulka, wakaas fadliga Jahaadka, waa Cisiga iyo Sharafta Mu'miniinta iyagoon Cidna Dulmiyeyn, markayse ka tageen Jahaadka waa kuwaas Dulloobay ee la Addoonsaday ee la Qaybsaday iyagoo Dhulkoodii lagu Xoogay lagana saaray. An-Nisaa' (94-96).

97. Kuway Oofsato Malaa'gtu iyagoo Dulmiyey Naftooda waxay ku Dhaahan maxaad ahaydeen waxayna dhaahan kuwo lagu Daciifsaday Dhulka (tabar yar), waxayna dhahaan (Malaa'igtii) miyuuna ahayn Dhulka Eebe Waasac ood ku Hijrootaan dhexdiisa, kuwaas Hooygoodu waa Jahanamo wayna u Xuntahay Aaye.

إِنَّ الَّذِينَ تَوَفَّاهُمُ الْمَلَائِكَةُ ظَالِمِي أَنْفُسِهِمْ قَالُوا فِيمَ كُنْتُمْ قَالُوا كُنَّا فِي الْأَرْضِ فَأَلْوَانَا الْأَرْضُ أَنْ تُرَىٰ
أَرْضَ اللَّهِ وَسِعَةَ فَتَاهُ جُرُوفِهَا قَالُوا لَيْتَ كُنَّا مَأْوَاهُمْ
جَهَنَّمَ وَسَاءَتْ مَصِيرًا ﴿٩٧﴾

98. Kuwa la Daciifsado oo ah Rag, Haween iyo Caruur oon tabar lahayn kuna Toosi Karin Jidka mooyee.

إِلَّا الْمُسْتَضْعِفِينَ مِنَ الرِّجَالِ وَالنِّسَاءِ وَالْوِلْدَانِ
لَا يَسْتَطِيعُونَ حِيلَةً وَلَا يَهْتَدُونَ سَبِيلًا ﴿٩٨﴾

99. Kuwaas wuxuu u dhawyahay Eebe inuu iska Cafiyo Xaggooda, Eebana waa Saamaxe Dhaafa (Dambiga).

قَالُوا لَيْتَ كُنَّا عَسَىٰ اللَّهُ أَنْ يَعْزُبَ عَنْهُمْ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا
غَفُورًا ﴿٩٩﴾

100. Ruuxii ku Hijrooda Jidka Eebe wuxuu ka heli Dhulka Magangal badan iyo Waasacnimo, Ruuxii ka Baxa Gurigiisa isagoo u Hijroon Xagga Eebe iyo Rasuulkiisa markaas uu haleelo Mawd-

﴿وَمَنْ يَهَاجِرْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ يَجِدْ فِي الْأَرْضِ مَرَامًا
كَثِيرًا وَسَعَةً وَمَنْ يَخْرُجْ مِنْ بَيْتِهِ مُهَاجِرًا إِلَى اللَّهِ
وِرَسُولِهِ نُؤْتِرْ لَهُ أَثْمَ الْبُيُوتِ الَّتِي كَفَرَ وَعَلَى اللَّهِ

ku (Geeridu) wuxuu ku sugnaaday Ajrigiisu Eebe (Fadli dartiis) Eebana waa (Dambi) Dhaafe Naxariista.

وَكَانَ اللَّهُ عَفُورًا رَحِيمًا ﴿١٣٠﴾

Diinta Islaamku ma ogola inay ku dullaysato Gaaloo adoo Muslim ah, maxaa yeelay waa laga fogaan karaa si loogu darbado Jahaadkooda siday faleen Muslimiintii hore, hase yeeshee Dadka tabarta yar ee ah Rag, Haween iyo Caruurba dhib ma saarra hadday ku dhexnoolaaadaan, Eebana wuxuu u dhawyahay inuu iska Saamaxo, Ruuxiise dar Eebe u Hijrooda wuxuu ka heli Dhulka Khayr iyo Waasacnimo, ciddii ka baxda Gurigeeda iyadoo u hijroon dar Eebe iyo Rassulka oo dhinta Kuwaas Eebaa Ajir iyo Wanaag ku Abaal marin. Taasina waxay ku tusin inay Waajib tahay in la Wanaajiyu Niyada, siduu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) uu yidhi: Camalku waa uuun Niyod cid walbana waxay Mudan waxay Niyooto.. Tan kale waa inaan Muslim qaadanin Dullaynta Gaalada, uuna Dulliga Gaalada ka baxo si kasta oo Suurowda oo Hijro iyo ka Durkid ah, isagoo la Jahaadi. An-Nisaa' (97-100).

101. Haddaad ku Safartaan Dhulka ma aha korkiinna Dhib (Dambi) inaad Gaabisaan Salaadda haddaad ka Cab-sataan inay idin Fidmeeyaan (Dhibaan) kuwa Gaaloobay, Gaaladuna waxay idiin yihiin Col Cad.

وَإِذَا صَرَّفْتُمْ فِي الْأَرْضِ فَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَنْ تَقْصُرُوا مِنَ الصَّلَاةِ إِنْ خِفْتُمْ أَنْ يَفْتِكُمُ الَّذِينَ كَفَرُوا إِنَّ الْكَافِرِينَ كَانُوا لَكُمْ عَدُوًّا مُّبِينًا ﴿١٥١﴾

102. Markaad tahay dhexdooda Muslimiinta ood u oogto Salaadda ha kula tukato Koox ka mid ah, hana Qaateen Hubkooda, markay Sujuudaan ha ahaadeen Gadaashiinna, hana timaado Koox kale oon Tukanin hana Tukadeen la jirkaaga hana Qaateen Digtoonidooda iyo Hubkooda, waxay Jecelyihiin kuwa Gaaloobay inaad halmaantaan Hubkiinna iyo Alaabtiinna oo markaas ay idin soo Weeraraan mar kaliya (Idinku kadiyaan), Korkiinna ma aha Dhib hadduu idin hayo dhib Roob ah ama aad tihiin kuwa buka inaad dajisaan Hubka, Qaatana Digtoonidiinna, Eebana wuxuu u diyaariyey Gaalada Cadaab wax Dulleeya.

وَإِذَا كُنْتُمْ فِيهَا فَاقْتُمْ لَهُمُ الصَّلَاةَ فَلْتَقُصِرْ طَائِفَةٌ مِنْهُمْ مَعَكَ وَيَأْخُذُوا أَسْلِحَتَهُمْ فَإِذَا سَجَدُوا فَلْيَكُونُوا مِنْ وَرَائِكُمْ وَلِلَّذِينَ طَائِفَةٌ أُخْرَىٰ لَمْ يُصَلُّوا فَلْيُصَلُّوا مَعَكَ وَيَأْخُذُوا حِذْرَهُمْ وَأَسْلِحَتَهُمْ وَذَ الَّذِينَ كَفَرُوا لَوْ تَعَفَّلُونَ عَنْ أَسْلِحَتِكُمْ وَأَمْتِعَتِكُمْ فَيَمِيلُونَ عَلَيْكُمْ مَيْلَةً وَاحِدَةً وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ إِنْ كَانَ بِكُمْ أُنْزَىٰ مِنْ مَطَرٍ أَوْ كُنْتُمْ مَرَضًا أَنْ تَقْصُرُوا أَسْلِحَتَكُمْ وَسَؤْلُوا حِذْرَكُمْ إِنَّ اللَّهَ أَعَدَّ لِلْكَافِرِينَ عَذَابًا مُهِينًا ﴿١٥٢﴾

Aayadda hore waxay ka warrami inay Banaantahay Gaabinta Salaadda marka socotada la yahay, taasoo ah in Duhurka, Casarka iyo Cishaha Labo Labo laga Tukado, waana Naxariis Eebe iyo Fududayn.

Aayadda kale waxay ka warrami Salaadda waqtiga Dagaalka iyo sida loo Tukan, oo ah in Qoonna Tukan Qoonna Ilaalin Colka iyagoo Hubka haysta. Taasina waxay ku tusin waynida Salaadda iyo

Jameecaadka iyo inaan laga tagayn, tan kale waxay ku tusin Ahmiyadda Jahaadka iyo Diyaargarowga. Arrinta Salaadda Dagaalka iyo Cabsida waxay ku faah faahsan tahay Kutubaha, waxaase muhiim ah in la ogaado Waynideeda iyo Waajibnimadeeda. An-Nisaa' (101-102).

103. Markaad gudataan Salaadda ku Xusa Eebe Taagni, Fadhi iyo Dhiniciinaba (Jiif) markaad xasishaanna (Aamin noqotaan) Ooga Salaadda (Dhammeeya), Salaaddu waxay ku tahay Mu'miniinta Xukun Waqtiyeysan (Muddaysan).

فَإِذَا قَضَيْتُمُ الصَّلَاةَ فَادْكُرُوا اللَّهَ وِسْمًا
وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِكُمْ فَإِذَا اطْمَأْنَنْتُمْ
 فَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ إِنَّ الصَّلَاةَ كَانَتْ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ
 كِتَابًا مَّقْرُونًا ﴿١٠٣﴾

104. Haka Daciifina (Jilcina) Doonidda Qoomka (Gaalada) haddaad tihiin kuwa Xanuunsan iyaguba way xanuunsan sidaad u xanuunsanaysaan, waxaadna ka rajaynaysaan Eebe waxayna ka rajaynayn, Eebana waa Oge falsan.

وَلَا تَهِنُوا فِي اتِّبَاعِ الْقَوْمِ الَّذِينَ كُفَرُوا تَأْتُمُونَهُمْ
 يَأْتُمُونَ كَمَا تَأْتُمُونَ وَتَرْجُونَ مِنْ اللَّهِ
 مَا لَا يَرْجُونَ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا
 حَكِيمًا ﴿١٠٤﴾

105. Annagaa kugu soo Dajinnay Kitaabka si Xaq ah si aad ugu kala Xukunto Dadka dhexdiisa wuxuu ku tusiyo Eebe, hana u noqonin Khaa'imiinta mid u dooda.

إِنَّا أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ لِتَحْكُمَ بَيْنَ
 النَّاسِ بِمَا أَرَىٰكَ اللَّهُ وَلَا تَكُنْ لِلْخَافِيِّينَ
 حَصِيصًا ﴿١٠٥﴾

106. Dambi dhaaf warso Eebe, Ilaahay waa Dambi Dhaafe Naxariista.

وَأَسْتَغْفِرِ اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَفُورًا رَحِيمًا ﴿١٠٦﴾

107. Ha ka Doodin kuwa Naftooda ka dhigay khaa'inad, Eebana ma Jecla Khayaamo badane Dambi badan.

وَلَا تَجِدِلْ عَنِ الَّذِينَ يَخْتَلِفُونَ أُنْفُسَهُمْ إِنَّ اللَّهَ
 لَا يُجِبُ مَنْ كَانَتْ خَوَاتِمًا أَيْمَانًا ﴿١٠٧﴾

108. Waxay iska qarinqa Dadka iskamana Qariyaan Eebe isagoo la jooga markay Maamuli wuxuusan raalli ka ahayn oo hadal ah, Eebana waxay Camal Fali wuu Koobay.

يَسْتَخْفُونَ مِنَ النَّاسِ وَلَا يَسْتَخْفُونَ مِنَ اللَّهِ
 وَهُمْ مَعَهُمْ يُذَيَّبُ مَا لَا يَرْضَىٰ مِنَ الْقَوْلِ
 وَكَانَ اللَّهُ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطًا ﴿١٠٨﴾

109. Idinku kuwaasow waad ka doodeen Xaggooda Nolosha Adduunyo, yaase ka doodi Xaggooda Maalinta Qiyaame ama u noqon Wakiil.

هَآأَنُفُهُمْ هَآؤَلَاءَ جَدَلْتُمْ عَنْهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا
 فَمَنْ يُجَادِلِ اللَّهَ عَنْهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ أَمْ مَنْ يَكُونُ
 عَلَيْهِمْ وَكِيلًا ﴿١٠٩﴾

Aayadahanna waxay caddayn in Eebe la Xuso Salaadda Dabadeed iyo si kastoo la yahay, markaan Dagaal lajooginna Salaadda la dhamaystiro, tan kale waa inaan Jahaadka laga Cabsanin illeen haddaynu Xanuunsan Gaaladuba way Xanuunsane waxaynu Eebana ka rajayn Janno iyo Liibaan ayna iyagu rajaynayn. Quraankana waxaa loo soo dajiyey in laysku Xukumo, Xumaantana waa inaan Garab

la siin, Eebana Dambi dhaaf la warsado oon lagana doodin Xagga kuwa Khaa'imiinta ah, ee Dadka iska Qarin, Eebana aan iska ilaalinaayn markay wax qarsan, Cid Qiyaame wax u tarina ma jirto. An-Nisaa' (103-109).

110. Ruuxii fala Xumaan ama Dulmiya Naftiisa (Dambaaba) markaas dambi dhaaf warsada Eebe wuxuu ka heli (ogaanna) isagoo Dambi dhaafa ah Naxariistana.

وَمَنْ يَعْمَلْ سُوءًا أَوْ يَظْمِرْ نَفْسَهُ رُءُومًا يَسْتَعْفِفْ
اللَّهُ يُجِدْ اللَّهُ عَفْوَكَ رَحِيمًا ﴿١١٠﴾

111. Ruuxii kasbada danbi wuxuu uun u kasbaday naftiisa (Dhibkeeda) Eebana waa oge Falsan.

وَمَنْ يَكْسِبْ إِثْمًا فَإِنَّمَا يَكْسِبُهُ عَلَى نَفْسِهِ
وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١١١﴾

112. Ruuxii kasbada Gaf ama Dambi markaas ku gana Dambiga (ku sheega) mid bari ah wuxuu Xambaartay Been abuurasho iyo Dambi Cad.

وَمَنْ يَكْسِبْ حَيْثُ أَوْ إِثْمًا ثُمَّ يَرْمِ بِهِ
بُرْيًا فَقَدْ آخَضَ مَثَلًا وَثَمَامِينًا ﴿١١٢﴾

113. Hadduusan jirin fadliga Eebee korkaaga iyo Naxariistiisa waxay Hammin lahayd Koox (dooni lahayd) oo ka mid ah inay ku dhumiyaan mana dhumiyaan Naftooda mooyee mana kaa dhibaana waxba, wuxuuna kugu soo dajiyey Eebe Kitaabka iyo Xigmadada wuxuuna ku baray waxaadan aqoon Fadliga Eebana korkaaga waa ku waynyahay.

وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكَ وَرَحْمَتُهُ لَهَمَّتْ طَائِفَةٌ
مِّنْهُمْ أَنْ يُضِلُّوكَ وَمَا يُضِلُّونَ إِلَّا أَنْفُسَهُمْ
وَمَا يُضِلُّونَكَ مِن شَيْءٍ وَأَنْزَلَ اللَّهُ عَلَيْكَ
الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَعَلَّمَكَ مَا لَمْ تَكُن تَعْلَمُ
وَكَانَ فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكَ عَظِيمًا ﴿١١٣﴾

114. Khayr ma leh wax badan oo Faqooda ah, oon ahayn mid fara Sadaqo ama Wanaag ama Hagaajin Dadka dhexdooda, Ruuxii fala Saas doonid raalli ahaanshaha Eebe waxaanu siin Ajir wayn.

* لَّا خَيْرَ فِي كَثِيرٍ مِّنْ جَبْوَاهُمْ إِلَّا مَنْ أَمَرَ
بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَرِحَ النَّاسُ
وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ ابْتِغَاءَ مَرْضَاتِ اللَّهِ فَسَوْفَ
نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿١١٤﴾

115. Ruuxii Khilaafa Rasuulka ka dib intuu u cadaaday Hanuunku oo Raaca Jidka Mu'miniinta midaan ahayn waxaa uga wali yeeleynaa wuxuu yeeshay waxaana galinaynaa Jahannamo iyaadaana u Xun meel loo ahaado.

وَمَنْ يُشَاقِقِ الرَّسُولَ مِن بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ
لَهُ الْهُدَىٰ وَيَتَّبِعْ غَيْرَ سَبِيلِ الْمُؤْمِنِينَ نُوَلِّهِ مَا
يَوَلَّىٰ وَنُصَلِّهِ ۗ جَهَنَّمَ وَسَاءَتْ مَصِيرًا ﴿١١٥﴾

Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Wuxuu uga warramay Eebe Addoomadiisa Cafgiisa, Dulqaadkiisa, Deeqiisa, Naxariistiisa Waasaca ah iyo Dambi dhaafkiisa, Ruuxii Dambaaba ha yaraado ama ha waynaado oo dambi dhaaf warsada Eebe, wuxuu heli Eebe oo Dambi dhaafi oo Naxariisan, haba ka waynaato Samaawaadka iyo Dhulka iyo Buuraha. Tan kale Gaaladu waxay uun baadiyeyn naftooda. Eebana wuxuu siiyey Nabiga Kitaab iyo Xigmo wuxuuna baray wuxuuna aqoonin Eebaana Fadli wayn siiyay.

Faqaan Wanaag ahayna ma fiicna, ciddii ka leexata Jidka Nabiga iyo Mu'iniintana wuxuu galin Naar daran. An-Nisaa' (110-115).

116. Eebe ma dhaaf in lala Wadaajiyo (Cidkale Cibaadada) wuuse ka dhaafaa wixii waxaas ka soo hadhay Cidduu doono, Ruuxii la wadaajiya Eebe wuxuu dhumay dhumid wayn.

إِنَّ اللَّهَ لَا يَغْفِرُ أَنْ يُشْرَكَ بِهِ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَلِكَ لِمَنْ يَشَاءُ وَمَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا بَعِيدًا ﴿١١٦﴾

117. ma Caabudayaan Eebe ka sokow waxaan dhadig ahayn, mana Caabudayaan waxaan Shaydaan madax adag ahayn.

إِنْ يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ إِلَّا إِنْتُمْ وَإِنْ يَدْعُونَ إِلَّا الشَّيْطَانَ أَقْرَبًا ﴿١١٧﴾

118. Ha Lacnado Eebe Shaydaan wuxuu yidhi waxaan ku yeelan Addoma-daada Qayb Sugaan.

لَعَنَهُ اللَّهُ وَقَالَ لَأَتَّخِذَنَّ مِنْ عِبَادِكَ نَصِيبًا مَفْرُوضًا ﴿١١٨﴾

119. waan baadiyeyn waan yididiilo (Xun) galin waana fari (Xumaanta) waxayna jeex jeexi Dhagaha Xoolaha waana fari (Xumaanta) waxayna doorin abuurka Eebe, ruuxii ka yeesha shaydaan Wali Eebe ka sokow dhab ahaan buu u Khasaaray Khasaare Cad.

وَلَأُضِلَّنَّهُمْ وَلَا أُمَيِّدُهُمْ وَلَا أَمُرُّهُمْ فَلْيَفْعَلُوا بِأَنفُسِهِمْ أَفَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ خَلَقَ الشَّيْطَانَ وَلِيًّا مَنْ دُونِ اللَّهِ فَقَدْ خَسِرَ خُسْرًا مُبِينًا ﴿١١٩﴾

120. wuu u yaboohi oo yididiila galin mana yabooho shaydaan waxaan dha-gar ahayn.

يَعِدُّهُمْ وَيُمَيِّدُهُمْ وَمَا يَعِدُهُمُ الشَّيْطَانُ إِلَّا غُرُورًا ﴿١٢٠﴾

121. kuwaasna hooygoodu waa Jahan-namo kamana helaan xaggeeda iilasho (iyo fakasho).

أُولَئِكَ مَا أَوْلَاهُمْ جَهَنَّمَ وَلَا يَجِدُونَ عَنْهَا مَحْيَصًا ﴿١٢١﴾

122. kuwa rumeeyey xaqa oo fala camal fiican waxaannu galin Jannooyin oy socoto dhexdeeda Wabiyaal oyna ku waari dhexdeeda waligeed, waana ya-booha Eebe oo sugan, yaa ka run badan Eebe hadal (cidna).

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ سَنُدْخِلُهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا وَعْدَ اللَّهِ حَقًّا وَمَنْ أَصْدَقُ مِنَ اللَّهِ قِيلًا ﴿١٢٢﴾

Eebe wuu ka dhaafaa waxaan gaalnimo ahayn Cidduu doono, gaalana waxay Caabudaan Sanamyo iyo shaydaan Eebe lacnaday oo ballan qaaday inuu qayb ku yeeshaa Dadka, kuna dhaartay inuu dhumiya oo Xumaan faraa intay ka dooriyaan Abuurka Eebe, ciddii shaydaan wali ka yeelatana wuxuu khasaaray khasaare wayn. Wuxuu yaboohina waa dhagar iyo naar, ciddiise xaqa raacda oo camal fiican fasha wuxuu gali janno uu ku waari, Eebana waa runle, Nabiguna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi:

Hadal waxaa u runbadan hadalka Eebe, hanuunna waxaa u fiican hanuunka Muxamed, waxaana u xun umuuraha waxaa la soo darriley waana Bidco baadi ah. An-Nisaa' (116-122).

123. Ma aha (xaalku) yididiiladiinna iyo yididiilada ehelu Kitaabka midna, ciddii fasha xumaan saa laga Abaal marin mana helayo Eebe ka sokow wali iyo gargaare (midna).

لَيْسَ بِأَمَانِيكُمْ وَلَا أَمَانِي أَهْلِ الْكِتَابِ
مَنْ يَعْمَلْ سُوءًا يُجْزَى بِهِ وَلَا يَجِدْ لَهُ مِنْ
دُونِ اللَّهِ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا ﴿١٢٣﴾

124. ruuxii fala wanaag lab ah ama dhadig isagoo rumeysan (xaqa) kuwaasu waxay gali Jannada lagamana dulmiyo duleel (laftimireed).

وَمَنْ يَعْمَلْ مِنَ الصَّالِحَاتِ مِنْ ذَكَرٍ
أُولَئِكَ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَأُولَئِكَ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ
وَلَا يُظْلَمُونَ نَبِيًّا ﴿١٢٤﴾

125. yaa ka diin fiican ruux u jeediyey wajigiisa Eebe isagoo sama Fali oo raaca diinta (Nabi) Ibraahim, wuxuuna ka yeeshay Eebe Ibrahiim khaliil (mid u gaar ah).

وَمَنْ أَحْسَنُ دِينًا مِمَّنْ أَسَمَهُ وَجْهَهُ، لِلَّهِ وَهُوَ
مُحْسِنٌ وَأَتَّبِعْ مِلَّةَ إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا وَأَتَّخِذِ اللَّهَ
إِبْرَاهِيمَ حَلِيلًا ﴿١٢٥﴾

126. Eebe waxaa u sugnaaday waxa ku sugan Samooyinka iyo dhulka, Eebana waa wax walba koobe.

وَلِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَكَانَ اللَّهُ
بِكُلِّ شَيْءٍ مُّحِيطًا ﴿١٢٦﴾

127. waxay ku warsan Haweenka, waxaad dhahdaa Eebaa idiin fidyoon (sheegi) Xaalkooda iyo waxa lagu akhriyi korkiinna Kitaabka Haweenka Agoonta ah ee ah kuwaydaan siinayn waxaa loo qadaray oo doonaysaan inaad guursataan iyo kuwa tabarta yar ee caruurta ah, iyo inaad u maamushaan Agoonta cadaalad, waxaad fashaan oo kheeyr ahna Eebe waa ogyahay.

وَيَسْتَفْتُونَكَ فِي النِّسَاءِ قُلِ اللَّهُ يُفْتِيكُمْ
فِيهِنَّ وَمَا يُثَلِّ عَلَيْكُمْ فِي الْكِتَابِ فِي يَسَّرَ
النِّسَاءَ الَّتِي لَا تَنْوَدُهُنَّ مَا كَتَبَ لَهُنَّ
وَرَزَعْنَ أَنْ تَنْكِحُوهُنَّ وَالْمُسْتَضْعَفِينَ مِنَ
الْوَالِدَانِ وَأَنْ تَقُومُوا لِلنِّسَاءِ بِالْقِسْطِ وَمَا تَفَعَّلُوا
مِنْ خَيْرٍ فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِهِ عَلِيمًا ﴿١٢٧﴾

Waxaa jirtay inay Isufaanee Muslimiin iyo Gaalo, markaas Eebe soo dajiyey Aayaddan mana aha cidna waxay iyadu doonto ee Xumaan iyo Wanaagba waa layska abaal marin, Rag iyo Haweenka waxba lagama Nusqaamiyo wanaagay falaan. Wax ka ficanna ma jiro cid raacday waddadii Nabi Ibraahim oo ah Diinta Islaamka. Aayadda dambana waxay ka warrami sida loola dhaqmi Haweenka Agoonta ah ee dhaqaalaynaysaan iyo kuwa tabarta yar ee caruurta ah iyo in agoonta cadaalad lagu dhaqo, illeen Eebaa wax walba oge. Markay soo dagtay Aayadda hore yey naaxeen Asaxaabtii oy

dheheen waxba uma reebin Ummadan, markaasuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi: Way soo dagtaye bishaaraysta oo dhex dhexaysta.. An-Nisaa' (123-127).

128. hadday Haweeney ka cabsato Ninkeeda xaggiisa fogaansho ama jeed-sasho dhib ma saara korkooda hadday heshiiyaan heshiis, heshiiskaana khayr ah, waxaana lagu soo kulmiyey nafta bakhaynimo, haddaad se Wanaag fashaan ood dhawrsataan Eebe waxaad Camal falaysaan waa ogyahay.

وَإِنْ أَمْرَةٌ حَاقَتْ مِنْ بَعْلِهَا نُشُورًا أَوْ إِعْرَاضًا فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِمَا أَنْ يُصْلِحَا بَيْنَهُمَا صُلْحًا وَالصُّلْحُ خَيْرٌ وَأُحْضِرَتِ الْأَنْفُسُ الشُّحَّ وَإِنْ تُحْسِنُوا وَتَتَّقُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ يَمَّا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿١٢٨﴾

129. ma kartaan inaad sintaan Haweenkiinna dhexdooda aadba dadaasheene ee ha ka iilanina iilasho dhan, oo ka tagtaan sida mid xidhan (dayacan), haddaad wanaajisaan ood dhawrsataan Eebe waa dambi dhaafe Naxariista.

وَلَنْ تَسْتَطِيعُوا أَنْ تَعْدِلُوا بَيْنَ النِّسَاءِ وَلَوْ حَرَصْتُمْ فَلَا تَمْلِكُوا كَلَّ الْأَيْدِي فَتَدْرُوهَا كَمَا لَمَعَتْ قَدْرًا وَإِنْ تَصْلِحُوا وَتَتَّقُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ عَفُورًا رَحِيمًا ﴿١٢٩﴾

130. hadday kala tagaan wuu kaafiyaa Eebe mid kasta waasacnimadiisa, Eebana waa waasac (Fadligiisu) waana falsame.

وَلَنْ يَتَّقَرَ قَالِعِنَ اللَّهُ كُفْرًا مِنْ سَعْيِهِ وَكَانَ اللَّهُ وَسِعًا حَكِيمًا ﴿١٣٠﴾

131. Eebaa iska leh waxa Samaawaadka ku sugan iyo dhulka, waxaana u dar-daanay kuwii la siiyey Kitaabka ee idinka horeeyey iyo idinkaba ka dhawrsada Eebe, haddaadse gaaloowdaan Eebe waxaa u sugnaaday waxa ku sugan Samaawaadka iyo dhulka. Eebana waa hodan Amaanan.

وَلِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَلَقَدْ وَصَّيْنَا الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِكُمْ وَإِيَّاكُمْ أَنْ اتَّقُوا اللَّهَ وَإِنْ تَكْفُرُوا فَإِنَّ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَكَانَ اللَّهُ غَنِيًّا حَمِيدًا ﴿١٣١﴾

132. Eebaa iska leh waxa ku sugan Samaawaadka iyo Dhulka waana ku filanyahay Eebe Wakiil.

وَلِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَكَفَى بِاللَّهِ وَكِيلًا ﴿١٣٢﴾

133. hadduu doono wuu idin tagsiin (dhamayn) Dadow lana imaan kuwo kale waana karaa Eebe Taas.

إِنْ يَشَاءُ يُدْهِبْكُمْ أَهْلَ النَّاسِ وَيَأْتِ بِآخَرِينَ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا ذَكِيمًا ﴿١٣٣﴾

134. Ruuxii dooni abaal Adduunyo Eebe agtiisa yuu jiraa Abaalka Adduunyo iyo Aakhiraba Eebana waa Maqle Arka.

مَنْ كَانَ يُرِيدُ ثَوَابَ الدُّنْيَا فَعِنْدَ اللَّهِ ثَوَابُ الدُّنْيَا
وَالْآخِرَةِ وَكَانَ اللَّهُ سَمِيعًا بَصِيرًا ﴿١٣٤﴾

Hadday haweenaydu ka kasto ninkeeda Fogaansho ama Jeedsasho waa inay heshiiyaan XuMaantana Layska jiraa, tan kale in caddaaladda lagu dadaalo ciddii Laba haween Qabta, haddii lakala tagana Eebaa deeqi cid walba, Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ciddii laba haween qaba oo u iisha midood wuxuu yimaadaa Maalinta Qiyaame isagoo dhinac lexxsan. Tan kale Eebaa Xukunka iska leh, wuxuuna faray Dadka dhamaan Alla ka yaabid, illeen hadduu doono wuu dhamayn karaa Dadkee, Aakhiro iyo Adduunba Eebaa iska leh, waana in si quruxsan Eebe looga Doono. An-Nisaa' (128-134).

135. kuwa (Xaqa) rumeeyow noqda kuwo u istaaga Caddaalad oo ah marag Eebe, naftiinnaba ha ahaato ama Waa- lidkiin ama qaraabo, hadday hodan yihiin ama faqiir Eebaa u mudnaansho badan ee ha ka raacina hawada inaad Caddaalo fashaan, haddaadse iilataan ama jeedsataan Eebe waxaad camal falaysaan waa ogyahay.

* يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُونُوا قَوَّامِينَ بِالْقِسْطِ شُهَدَاءَ
لِلَّهِ وَلَوْ عَلَىٰ أَنْفُسِكُمْ أَوِ الْوَالِدِينَ وَالْأَقْرَبِينَ إِنْ
يَكُنْ غَنِيًّا أَوْ فَقِيرًا فَاللَّهُ أَوْلَىٰ بِهِمَا فَلَا تَتَّبِعُوا
الْهَوَىٰ أَنْ تَعْدُوا وَإِنَّ تَوَلَّوْا أَوْ تَعْرِضُوا فَإِنَّ اللَّهَ
كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿١٣٥﴾

136. kuwa (Xaqa) rumeeyow rumeeya Eebe (si dhabah) iyo Rasuulkiisa iyo Kitaabka uu ku dejiyey Rasuulkiisa iyo Kitaabkuu u dejiyey horay, ruuxiise ka gaalooba Eebe, malaa'igtiisa, kutubtiisa, rasuuladiisa iyo maalinta dambe (Qiyaamada) wuu dhumay dhumid fog.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَمْوَالُ اللَّهِ وَرَسُولِهِ
وَالْكِتَابِ الَّذِي نَزَّلَ عَلَىٰ رَسُولِهِ وَالْكِتَابِ
الَّذِي أُنزِلَ مِنْ قَبْلُ وَمَنْ يَكْفُرْ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ
وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا
بَعِيدًا ﴿١٣٦﴾

137. kuwa rumeeyey ee gaaloobay ee hadana rumeeyey ee gaaloobay markaas sii badsaday Gaalnimo ma aha Eebe mid u dhaafi iyaga, kumana hanuuniyo Jidka (Toosan).

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا ثُمَّ كَفَرُوا ثُمَّ آمَنُوا ثُمَّ كَفَرُوا
ثُمَّ أَرَادُوا كُفْرًا وَلَكِنَّ اللَّهَ يُبَدِّلُ الْأَلْهَامَ
سَيِّئًا ﴿١٣٧﴾

138. ugu bishaaree munaafiqiinta inay mudan Cadaab daran.

بَشِيرِ الْمُنَافِقِينَ بِأَنَّهُمْ عَدَاؤُا أَلِيمًا ﴿١٣٨﴾

139. waana kuwa ka yeesha Gaalada sokeeye Mu'miniinta ka sokow, ma

الَّذِينَ يَتَخَذُونَ الْكُفْرِينَ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِ

waxay ka dooni Agtooda sharaf, sharafta Eebaa iska leh dhammaanteed.

140. wuxuuna ku soo dejiyey korkiinna Kitaabka dhexdiisa haddaad maqashaan Aayaadka Eebe oo laga gaaloobi ama lagu jees jeesi ha fadhiisanina agtooda intay ka dhumbadaan hadal kale, hadii kale waxaad noqonaysaan iyaga oo kale, Eebana wuxuu ku kulmin Munaafiqiinta iyo Gaalada Jahannamo dhammaan.

Waa in caddaaladda lagu dadaalaa Naftaada, Waalidkaa iyo Qaraabadaadaba ha ahaatee, illeen Eebaa ku mudnaan badane, waana inaan hawada la raacin waana in si dhab ah loo rumeeyo Eebe, Rasuulkiisa, Kitaabka Quraanka ah iyo kutubtii horaba, ciddii ka gaalowda Eebe, malaa'igta, Rasuulada iyo maalinta dambe waa cid dhuntay. Kuwase marna gaalooba marna wax rumeyn Waa kuwo dhumay, munaafiqiintana waxay gali naar daran, waana kuwa gaalada sokeeye ka dhigan, kuna jees jeesa quraanka iyo xaqa, abaalkooduna waa naar. An-Nisaa' (135-140).

141. oo ah kuwa idin la suga (dhibaato) hadduu gargaar xagga Eebe idiinka ahaado waxay dhihi miyaanaan idinla jirin, hadduu gaalada u sugnaado nasiibna waxay dhahaan miyaanaan idin adkeynin oonaan idinka reebin Mu'miniinta, Eebaa xukumi dhexdooda maalinta Qiyaame, mana ugu yeelayo Eebe gaalada mu'miniita korkooda waddo.

142. munaafiqiintu waxay dhagri Eebe (isku dayi) isna wuu dhagri, markay u istaagaan Salaaddana way istaagaan iyagoo wahsan, oo is tusi Dadka Mana xusaan Eebe wax yar mooyee.

143. waxayna ku noqnoqon (wareeri) arrintaas dhexdeeda kuwaasina lama jiraan kuwaana lama jiraan, cidduu dhumiyey Eebe uma heshid Waddo (cid hanuunin).

144. kuwa (Xaqa) rumeeyow ha ka yeelanina Gaalada sokeeye Mu'miniin-

الْمُؤْمِنِينَ أَتَّبِعُونَ عِنْدَهُمُ الْعِرَّةَ فَإِنَّ الْعِرَّةَ لِلَّهِ جَمِيعًا ﴿١٣٦﴾

وَقَدْ نَزَّلَ عَلَيْكُمْ فِي الْكِتَابِ أَنْ إِذَا سَمِعْتُمْ آيَاتَ اللَّهِ يُكْفَرُ بِهَا وَيَسْتَهْزِئُ بِهَا فَلَا تَقْعُدُوا مَعَهُمْ حَتَّى يَخُوضُوا فِي حَدِيثٍ غَرِيبٍ إِنَّكُمْ إِذَا أَنشَأْتُمُ الْبُيُوتَ لِلَّهِ جَمِيعٌ إِلَّا الْمُتَفَقِّهِينَ وَالْكَافِرِينَ فِي جَهَنَّمَ جَمِيعًا ﴿١٣٧﴾

الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ بِكُفْرٍ فَإِنْ كَانَ لَكُمْ فَتْحٌ مِنَ اللَّهِ قَالُوا أَلَمْ نَكُنْ مَعَكُمْ وَإِنْ كَانَ لِلْكَافِرِينَ نَصِيبٌ قَالُوا أَلَمْ نَسْتَحْوِذْ عَلَيْكُمْ وَنَمْنَعْكُمْ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ فَاللَّهُ يَحْكُمُ بَيْنَكُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَلَنْ يَجْعَلَ اللَّهُ لِلْكَافِرِينَ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ سَبِيلًا ﴿١٤١﴾

إِنَّ الْمُتَفَقِّهِينَ يُخَدِّعُونَ اللَّهَ وَهُوَ خَدِيعُهُمْ وَإِذَا قَامُوا إِلَى الصَّلَاةِ قَامُوا كَسَالَى يُرَاءُونَ النَّاسَ وَلَا يَذْكُرُونَ اللَّهَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٤٢﴾

مُذَبِّبِينَ بَيْنَ ذَلِكَ لَا إِلَى هَؤُلَاءِ وَلَا إِلَى هَؤُلَاءِ وَمَنْ يُضْلِلِ اللَّهُ فَلَنْ يَجِدَ لَهُ سَبِيلًا ﴿١٤٣﴾

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا يَتَّخِذُوا الْكَافِرِينَ أَوْلِيَاءَ

ta ka sokow, Ma waxaad doonaysaan inaad isugu yeeshaan Eebe korkiinna xujo cad (inuu idin ciqaabo).

مِن دُونِ الْمُؤْمِنِينَ أَتْرِيدُونَ أَنْ تَجْعَلُوا لِلَّهِ عَلَيْكُمْ سُلْطَانًا مُّبِينًا ﴿١٤١﴾

145. munaafiqiintu waxay ku sugnaan dabaqa hoose ee Naarta umanaheshid gargaare.

إِنَّ الْمُنَافِقِينَ فِي الدَّرَجَاتِ الْأَسْفَلِ مِنَ النَّارِ وَلَنْ يَجْعَلَ اللَّهُ لَهُمْ نَصِيرًا ﴿١٤٥﴾

146. kuwa toobadkeena ee wanaajiya camalka, oo isku dhawra Eebe, oo u kali yeela Diintooda (Cibaadadooda) Eebe kuwaasi waxay la jiri mu'miniinta, wuuna siin doonaan Eebe Mu'miniinta Ajir wayn.

إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا وَأَصْلَحُوا وَاعْتَصَمُوا بِاللَّهِ وَأَخْلَصُوا دِينَهُمْ لِلَّهِ فَأُولَئِكَ مَعَ الْمُؤْمِنِينَ وَسَوْفَ يُؤْتِي اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿١٤٦﴾

147. muxuu ku fali Eebe cadaabkiinna haddaad mahdisaan ood rumeysaan, Eebana waa mahdiye Waana Oge.

مَا يَعْمَلُ اللَّهُ بِعَدَابِكُمْ إِنْ شَكَرْتُمْ وَآمَنْتُمْ وَكَانَ اللَّهُ شَاكِرًا عَلِيمًا ﴿١٤٧﴾

Munaafiqiintu waa kuwa Muslimiinta la suga balaayo, hadday guul helaanna yidhaahda waan idin la jirnay, hadday Gaaladu wax gaadhaanna dhaha anagaa idin guulaynay, kuwaase Eebaa kala xukumi iyaga iyo Mu'miniinta, Eebana uguma yeelo Jid iyo Xujo Mu'miniinta korkeeda, munaafiqiintu waa kuwa Salaaddu ku culustahay Dadkana is tus tusiyo, oon meella haysan.

Tan kale waa inaan gaalo sokeeye laga dhigan Mu'miniinta intii la gudbo si aan ciqaab Eebe u imaan, munaafiq abaalkiisna waa dabaqa hoose ee Naarta, ciddiise Toobad keenta oo xaqa raacda Eebana dhab ahaan u caabuda waxba Eebe cadaabkeeda iyo Ciqaabteeda ku falimaayo, wuuna ku mahdin. Waxaana sugnaatay (Camalka Eebe u kali yeel wax yarbaa kugu fillaane) waxayna ku tusin naxariista Eebe iyo inuusan rabin Ciqaabta Addoomadiisa hadday toosnaadaan. An-Nisaa' (141-147).

148. Ma Jecla Eebe in lala Qayliyo Xumaan oo Hadal ah Ruux la Dulmiyey Mooyee, Eebana waa Maqle Og.

﴿لَا يَحِبُّ اللَّهُ الْجَهْرَ بِالسُّوْعِ مِنَ الْقَوْلِ إِلَّا مَن ظَلِمَ وَكَانَ اللَّهُ سَمِيعًا عَلِيمًا﴾ ﴿١٤٨﴾

149. Haddaad Muujisaan Khayr ama Qarisaan ama Cafidaan Xumaan Eebana waa Dhaafe kara.

إِنْ تَبْدُوا خَيْرًا أَوْ تُخَفُّوهُ أَوْ تُعَفُّوهُ فَمَا لَكُمْ مِنَ اللَّهِ إِنْ كَانَ عَفْوًا قَدِيرًا ﴿١٤٩﴾

150. Kuwa ka Gaalooba Eebe iyo Rasuulkiisa oo dooni inay kala Geeyaan Eebe iyo Rasuulkiisa oo odhan waxaannu Rumayn Qaar waana Diidi Qaar oo dooni inay ka yeeshaan Arrintaa dhexdeda Waddo.

إِنَّ الَّذِينَ يَكْفُرُونَ بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ وَيُرِيدُونَ أَنْ يُفَرِّقُوا بَيْنَ اللَّهِ وَرُسُلِهِ وَيَقُولُونَ نُؤْمِنُ بِبَعْضٍ وَنَكْفُرُ بِبَعْضٍ وَيُرِيدُونَ أَنْ يَتَّخِذُوا بَيْنَ ذَلِكَ سَبِيلًا ﴿١٥٠﴾

151. Kuwaasi iyaga umbaa Gaalo dhab ah, waxaana u darbannay Gaalada Cadaab wax Dulleeya.

أُولَئِكَ هُمُ الْكٰفِرُونَ حَقًّا وَأَعْتَدْنَا لِلْكَافِرِينَ عَذَابًا مُّهِينًا ﴿١٥١﴾

152. Kuwa rumeeye Eebe iyo Rasuulkiisa oon kala bixinin Cid ka mid ah kuwaas wuu Siindoonaa (Eebe) Ajirkooda, Eebana waa Dhaafe Naxariista.

وَالَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ وَلَمْ يُفَرِّقُوا بَيْنَ أَحَدٍ مِّنْهُمْ أُولَئِكَ سَوْفَ نُؤْتِيهِمْ أَجْرَهُمْ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَحِيمًا ﴿١٥٢﴾

153. Waxay ku warsan Ehelu Kitaabku Inaad kaga soo Dejiso Kitaab Xagga Samada, Dhabahaan yey u warsadeen (Nabi) Muuse wax ka wayn kaas waxayna dheheen noo tusi Eebe si Cad waxaana qabatay qaylo (daran) Dulmi-gooda dartiis, waxayna yeesheen Dibi intay u Timid Xujooyin, waana ka Cafinay Arrintaas, waxaana siinay Nabi Muuse Xujo Cad.

يَسْأَلُكَ أَهْلُ الْكِتَابِ أَنْ تَنزِلَ عَلَيْهِمْ كِتَابًا مِّنَ السَّمَاءِ فَقَدْ سَأَلُوا مُوسَىٰ أَكْبَرَ مِنْ ذَلِكَ قَالُوا ارأنا لله جهرة فأخذتهم الصبغة بظلمهم ثم اتخذوا العجل من بعد ما جاءتهم الكيوت فعصونا عن ذلك وآتينا موسى سلطانا ميينا ﴿١٥٣﴾

Ma habboona in Xumaan iyo Hadal dhib ah lala Qaylyo, Ciddiise la dulmiyo waxaa u bannaan inuu aarsado. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Ma jecla Eebe in ruuxna ruux Habaaro Haddaan la dulmiyin. Eebana wax walba waa ogyahay, Ciddii kala saarta Eebe iyo Rasuuladiisa kuwaasu waa Gaalo dhab ah Gaalana waxaa loo darbay Cadaab daran, Mu'miniintuse waxay mudan Janno illeen ma kala saarin Xaqee.

Tan kale ma habboona sidii Yuhuuddii Nabiga si madax adayg ah wax u warsan jiray illeen Caaday u tahaye waxayna warsadeen Nabi Muuse wax ka wayn, waana in laga fogaado Jidkooda. An-Nisaa' (148-153).

154. Waxaan koryeellay (Buurta) Dhuur Ballankoodii dartiis waxaana ku nidhi ka gala Irridda idinkoo Sujuudsan, waxaana ku nidhi ha ku xadgudbina Sabtida waxaana ka qaadnay Ballan adag.

وَرَفَعْنَا فَوْقَهُمُ الطُّورَ بِمِثْقَلِ ذَرَّةٍ لَّهُمْ ادْخُلُوا الْبَابَ سُجَّدًا وَقُلْنَا لَهُمْ لَا تَعْدُوا فِي السَّبْتِ وَأَخَذْنَا مِنْهُمْ مِثْقَالَ عِلْطَا ﴿١٥٤﴾

155. (Waan Lacnadnay) Burintooda Ballankooda iyo ka Gaalowgooda Aayaadka Eebe iyo u dilidda Nabiyada Xaqdarro iyo Hadalkooda Quluubtanadu way daboolantahay, saas ma aha ee waxaa Daabacay (daboolay) Eebe Gaalnimadooda darteed mana rumeeyaan wax yar mooyee.

فِيمَا نَقَضْتَهُمْ مِثْقَلَهُمْ وَكَفَرْتَهُمْ بِعَايَتِ اللَّهِ وَقَتْلِهِمُ الْأَنْبِيَاءَ بَعْدِ حَيْ وَقَوْلِهِمْ قُلُوبُنَا غُلْفٌ بَلْ طَمَعُ اللَّهِ عَلَيْهَا بِكُفْرِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُونَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٥٥﴾

156. iyo Gaalnimadooda darteed iyo Hadalkooda Maryama oy ku Been abuurteen si wayn.

وَكَفَرْتَهُمْ وَقَوْلِهِمْ عَلَىٰ مَرْيَمَ بُهْتَانًا عَظِيمًا ﴿١٥٦﴾

157. iyo Hadalkoodii ahaa anagaa Dilay Masiix Ciise Ibnu Maryam Ra-suulkii Eebe ahaa mayna Dilin mana Wadhin laakiin waa loo Shabahay, (ekeysiiyey), kuwii isku Khilaafay Ciise waxay kaga suganyihiin Shaki, wax Cilmi ahna uma leh oon ahayn Raacid male umana dilin dhab.

وَقَوْلِهِمْ إِنَّا قَتَلْنَا الْمَسِيحَ عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ رَسُولَ اللَّهِ وَمَا قَوْلُهُ وَمَا صَلَوَةٌ وَلَكِنْ شُحَّةٌ لَهُمْ وَإِنَّ الَّذِينَ اخْتَلَفُوا فِيهِ لَفِي شَكٍّ مِمَّا مَلَهُمْ بِهِ مِنْ عِلْمٍ إِلَّا اتِّبَاعَ الظَّنِّ وَمَا قَوْلَهُمْ يَقِينًا ﴿١٥٧﴾

158. Saas ma aha ee waxaa u koryeelay Xaggiisa Eebe, ilaahayna waa Adkaade Falsan.

بَلْ رَفَعَهُ اللَّهُ إِلَيْهِ وَكَانَ اللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿١٥٨﴾

159. Ehelu Kitaab kasta wuu rumeyn Ciise Geeridiisa ka hor, Maalinta Qiyaamana wuxuu ku noqon korkooda Markhaati.

وَإِنَّ مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ إِلَّا لَؤُومَةً يَدْعُو قَبْلَ مَوْتِهِمْ وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ يَكُونُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا ﴿١٥٩﴾

Waxaa kor kooda layeelay Buurta Dhuur waxaana la faray inay Hogaansamaan oo Sujuudaan lagana reebay inay Xad gudbaan, hase yeeshee markay Buriyeen Ballankii, oy ka Gaalooben Aayaadka Eebe oy laayeen Nabiyadii ooy Sheegen inay Quluubtoodu Daboollantahay iyo Xumaantay oo Sheegen Maryam iyo inay Dileen Nabi Ciise iyagoon Dilin Eebaase u "Moodsiiyey" shabahay Korna yeelay waxyaalahaas iyo wax la mid ah yaa Eebe u Ciqaabay una Lacnaday, una Dulleeey illeen Xaqay diideene. Qisada Nabi Ciise iyo Hooyadiina waa in loo Rumeeyo sida ku Cad Quraanka oo ah inuu yahay Addoon Eebe oo Nabi ah ee san wax Cibaada ah Mudan, waana doqonnimo in wax Eebe ka soo hadhay la Caabudo, An-nisaa' (154-159).

160. Dulmi kuwii Yuhuudoobay dartiis yaan uga Reebnay korkooda Wanaaga loo xalaaleeyey iyo ka Celintooda Jidka Eebe wax badan.

فِظَلِّمْ مِنَ الَّذِينَ هَادُوا حَرَمًا عَلَيْهِمْ طَبَعَتْ أَجَلَتْ لَهُمْ وِصْدَ هَرَمَ عَن سَبِيلِ اللَّهِ كَبِيرًا ﴿١٦٠﴾

161. Iyo Qaadashadooda Ribada iya-goo laga Reebay Xaggeeda iyo ku Cunidda Xoolaha Dadka si Baadil ah, waxaana u darbanay Gaalada ka mid ah Cadaab Daran.

وَأَخَذَهُمُ الرِّبَا وَقَدْ نُهُوا عَنْهُ وَأَكْبَهُمْ آمَالَ النَّاسِ بِالْبَطْلِ وَأَعْتَدْنَا لِلْكَافِرِينَ مِنْهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٦١﴾

162. Laakiin kuwa ku xeeldheer Cilmi-ga oo ka mid ah iyo Mu'miniintu waxay rumeyn waxa lagugu Dejiyay, iyo wixii la Dejiyey hortaa, iyo kuwa Oogo Salaadda ee Bixiya Zakada ee rumeeya Eebe iyo Maalintii Dambe kuwaas waxaan siinaynaa Ajir wayn.

لَكِن الرِّسْخُونَ فِي الْعِلْمِ مِنْهُمْ وَالْمُؤْمِنُونَ يُؤْمِنُونَ بِمَا أَنْزَلَ إِلَيْكَ وَمَا أَنْزَلَ مِنْ قَبْلِكَ وَالْمُقِيمِينَ الصَّلَاةَ وَالْمُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَالْمُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ أُولَئِكَ سَنُؤْتِيهِمْ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿١٦٢﴾

163. Annagaa kuu waxyoonnay sidaan ugu waxyoonaay (Nabi) Nuux iyo Nabiyadii ka dambeeyey waxaana u waxyoonaay Nabi Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub (Awlaad) Faracii, Ciise, Ayuub, Yuunus, Haaruun, Sulaymaan, waxaana siinay Daawuudna Zabuur.

﴿ إِنَّا أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ كَمَا أَوْحَيْنَا إِلَى نُوحٍ وَالنَّبِيِّينَ مِنْ بَعْدِهِ وَأَوْحَيْنَا إِلَى إِبْرَاهِيمَ وَإِسْمَاعِيلَ وَإِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ وَالْأَسْبَاطِ وَعِيسَى وَأَيُّوبَ وَيُوسُفَ وَمُوسَى وَهَارُونَ وَسُلَيْمَانَ وَآدَمَ إِنَّا نَدِينُكَ رُبُّوًّا ۗ ﴾

164. iyo Rasuullo aan kaaga Qisoonaay horay iyo Rasuullo aanaan kaaga qisoonaay, wuuna la Hadlay Eebe Nabi Muuse Hadal.

﴿ وَرُسُلًا قَدْ قَصَصْنَاهُمْ عَلَيْكَ مِنْ قَبْلُ وَرُسُلًا لَمْ نَقْصُصْهُمْ عَلَيْكَ وَكَلَّمَ اللَّهُ مُوسَى تَكْوِيمًا ۗ ﴾

165. Waa Rasuullo Bishaarayn oo Digi si ayan Dadka Xujo ugu yeelan Eebe ka dib Rasuullada, Eebana waa Adkaade Falsan.

﴿ رُسُلًا مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ لِيَقُولَ بِكُورٍ لِلنَّاسِ عَلَى اللَّهِ حُجَّةٌ بَعْدَ الرُّسُلِ وَكَانَ اللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا ۗ ﴾

Dulmigii Yuhuudda yaa looga Xarrimay waxyaalo u Xalaal ahaa iyo Jidka Xaqa ah ooy ka leexiyaan Dadka... iyo Cunidda Xaq darro ee Xoolaha Dadka. Kuwa Cilmiga leh ee Xaqa rumeeya oo ka mida iyo kuwa Rumeeya Xaqa oo Saladda iyo Zakada Guta waxay Mudan Ajriwayn. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeel) wuxuu ka mid yahay Nabiyada Eebe u waxyooday Eebana wuxuu u waxyooday Nabiyo Badan Qaar uu ka Qisooday iyo Qaar kalaba, waxaase Waajib ah in Guud ahaan loo rumeeyo inta la Sheegayna Gaar ahaan Xaqana la raaco. An-Nisaa' (160-165).

166. Laakiin Eebaa marag Furi wuxuu kugu Dejiyey wuxuuna ku Dejiyey Cilmigiisa, Malaa'igtuna way Marag furi, Eebana ku Filan Marag.

﴿ لَكِنَّ اللَّهَ يَشْهَدُ بِمَا أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ أَنْزَلْنَاهُ يَعْلَمُهُ ۗ وَالْمَلَائِكَةُ يَشْهَدُونَ وَكَفَى بِاللَّهِ شَهِيدًا ۗ ﴾

167. Kuwa Gaaloobay oo ka Leexiya Jidka Eebe waay Dhumeen Dhumid Fog.

﴿ إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَصَدُّوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ قَدْ ضَلُّوا ضَلَالًا بَعِيدًا ۗ ﴾

168. Kuwa Gaaloobay ee Dulmi falay ma aha Eebe kii u Dambi dhaafa ama ku Hanuuniya Jid.

﴿ إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَظَلَمُوا لَمْ يَكُنِ اللَّهُ لِيَعْفُرْ لَهُمْ وَلَا لِيَهْدِيَهُمْ طَرِيقًا ۗ ﴾

169. Jidka Jahannamo mooyee iyagoo ku waari Waligood, Arrintaasna waa u Fududahay Eebe.

﴿ إِلَّا طَرِيقَ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا وَكَانَ ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرًا ۗ ﴾

170. Dadow wuxuu idiinla Yimid Rasuulku Xaq Xagga eebe ee Rumeeya

﴿ يَا أَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَكُمْ الرَّسُولُ بِالْحَقِّ مِنْ رَبِّكُمْ

(Xaqa) saasaa idiin khayr roon, had-daad Gaalowdaanna Eebe waxaa u Sugnaaday waxa ku sugan Samaawaad-ka iyo Dhulka Eebana waa oge falsan.

فَمَا نُؤَخِّرُهُمْ إِلَّا الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِآيَاتِنَا وَيَتَذَكَّرُونَ
فَلَمَّا تَوَلَّوْا الْأَرْضَ أَنَّ اللَّهَ عَالِمٌ بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٧٦﴾

171. Ehelu Kitaabkoow ha ku Xadgud-bina Diintiinna hana ku Dhihina Eebe waxaan Xaq ahayn, Masiix Ciise Ibnu Maryam waa uun Rasuulkii eebe iyo Kalimadiisii uu ku Tuuray Maryama iyo Ruux Xaggiisa ah ee rumeeya Eebe iyo Rasuuladiisa, hana dhihina Saddex (Ilaah) reebtooma, saasaa idiin Khayr Roon, Eebe waa uun Ilaah Kaliya, waa ka Nasahanyahay in Ilmo u sugnaado, waxaa u sugnaaday waxa Samaawaad-ka iyo Dhulka ku sugan, Eebaana ku filan Wakiil.

يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لَا تَغْلِبُوا فِي دِينِكُمْ
وَلَا تَتَّبِعُوا عَلَى اللَّهِ إِلَّا الْحَقَّ إِنَّمَا الْمَسِيحُ
عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ رَسُولُ اللَّهِ وَكَلِمَتُهُ أَلْقَاهَا
إِلَى مَرْيَمَ وَرُوحٌ مِنْهُ فَآمَنُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ
وَلَا تَقُولُوا ثَلَاثَةٌ انْتَهُوا خَيْرًا لَكُمْ إِنَّمَا اللَّهُ
إِلَهٌ وَاحِدٌ سُبْحَانَهُ أَنْ يَكُونَ لَهُ وَلَدٌ لَهُ مَا فِي
السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَكَفَى بِاللَّهِ وَكِيلًا ﴿١٧٧﴾

Eebaa wax walba Og, cid Dhuntayna way Khasaartay waxayna la kulmi Ciqaab. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu la yimid Xaq Cad. Mana haboona in nabi Ciise iyo Diinta lagu Xadgudbo, Ciisena waa Addoon Eebe, Ilaahay waa Kali Saddex Ilaahna ma Jirto oo waa uun eebe Kaliya, Wehel iyo Caruurna uma baahna. An-Nisaa' (166-171).

172. Iskama kibriyo Masiix inuu ahaado Addoon Eebe, Malaa'igta la dha-weeyeyna (iskama kibriso) ruuxii iska kibriya Cibaadadiisa oo iswayneeya wuu u soo kulmin Xaggiisa Dhammaan.

لَنْ يَسْتَنْكِفَ الْمَسِيحُ أَنْ يَكُونَ عَبْدًا لِلَّهِ
وَلَا الْمَلَائِكَةُ الْمُقَرَّبُونَ وَمَنْ يَسْتَنْكِفْ عَنْ
عِبَادَتِهِ وَيَسْتَكْبِرْ فَسَيَحْشُرْهُمُ إِلَهُ
جَمِيعًا ﴿١٧٨﴾

173. Kuwa rumeeyey Xaqa oo Camal fiican fala wuxuu u Oofin Ajrigooda wuxuuna u kordhin Fadligiisa, kuwa iska wayneeya oo iskibriya wuxuu Cadaabi Cadaab Daran mana helayaan Eebe ka sokow Wali iyo Gargaare (midna).

فَأَمَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَيُوَفِّيهِمْ
أَجْرَهُمْ وَيَزِيدُهُمْ مِنْ فَضْلِهِ وَأَمَّا الَّذِينَ
انْتَكَبُوا وَأَسْتَكْبَرُوا فَيَعَذِّبُهُمْ عَذَابًا
أَلِيمًا وَلَا يَجِدُونَ لَهُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلِيًّا
وَلَا نَصِيرًا ﴿١٧٩﴾

174. Dadow waxaa idiin yimid Xujo Xagga Eebe ah waxaanan idiin soo Dejinay Nuur Cad.

يَأْتِيَهُمُ النَّاسُ فَيَدْعُوهُمْ بِهِمْ مِنْ رِيكِهِمْ وَأَنْزَلْنَا
إِلَيْكُمْ نُورًا مُبِينًا ﴿١٨٠﴾

175. Kuwa rumeeyase Eebe oo Qabsaday (isku dhawray) eebe (iyo Quraanka) wuxuu Galin Naxariis xaggiisa ah iyo Fadli wuxuuna ku Hanuunin Xaggiisa Jid Toosan.

فَأَمَّا الَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَأَعَصَمُوا بِهِ فَسَيُدْخِلُهُمْ
فِي رَحْمَةٍ مِنْهُ وَقَضَلٍ وَيَهْدِيهِمْ إِلَى صِرَاطٍ
مُسْتَقِيمًا ﴿٧٥﴾

176. Waxbay ku warsan, waxaad dhahdaa Eebaa idiin Fidyoon Kalaalada, hadduu dhinto Ruux aan Ilmo lahayn oo leh Walaashiis waxay Mudan Nus wuxuu ka tagay, isaguna wuu Dhaxli hadduusan iyada Ilmo u sugnaanin, hadday Labo yihiina waxay Mudan Saddex dalooloo Labo Dalool wuxuu ka tagay, hadday yihiin Walaal Rag iyo Haween ah kan Lab waxaa u sugnaaday Labo Dhadig Qaybtood, wuxuu idiin caddayn Eebe (Xaqa) inaydaan Dhumin Eebana wax kasta waa Ogyahay.

يَسْتَفْتُونَكَ قُلِ اللَّهُ يُفْتِيكُمْ فِي الْكَلَالَةِ إِنْ أَمْرُهُمْ
هَلَكَ لَيْسَ لَهُ، وَوَلَدٌ لَهُ، وَأُخْتُ فَلَهَا نِصْفُ مَا تَرَكَ
وَهُوَ رِثَتُهَا إِنْ لَوِيَ كُنْ لَهَا وَوَلَدٌ فَإِنْ كَانَتَا أَقْتَبَتَيْنِ
فَلَهُمَا الثُّلُثَانِ مِمَّا تَرَكَ وَإِنْ كَانُوا إِخْوَةً رِجَالًا
وَنِسَاءً فَلِلذَّكَرِ مِثْلُ حَظِّ الْأُنثِيَّتَيْنِ يَسْئَلُ اللَّهُ
لَكُمْ أَنْ تَضِلُّوا وَاللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٧٦﴾

Ciddii iska kibrisa ama iska waynaysa Cibaadada Eebe wuxuu la kulmi Eebe wuuna Abaal marin, Nabi Ciise iyo Malaa'igta Eebana iskama kibriyaan. Mana haboona in Cidna iska waynaysa Cibaadada Eebe. Suuradduna waxay ku Dhamaatay waxay ku Bilaabatay oo ah Dhaxalka si aan loo Dhumin Xaqana looga leexan ee loo Raaco Qaybta Eebe iyo Sharcigiisa Caadilka ah. An-Nisaa' (172-176).



Suurat Al-Maa'idah

سُورَةُ الْمَائِدَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

1. Kuwa (Xaqa) Rumeeyoow Oofiya Ballanka, waxaa Laydiin Baneeyey Xoolaha Nicmoolayda waxa laydinkoo Akhrin Korkiinna Mooyee idinkoon banaysanayn Ugaadhsiga idinkoo xarman Eebana wuxuu Xukumaa wuxuu Doono.

2. Kuwa (xaqa) Rumeeyow ha Banaysanina Calaamooyinka Eebe (waxa reeban) iyo bisha Xurmaysan iyo Hadyada iyo Midda loo Luqun Xidhay (Hadyada Baydka) iyo kuwa u Qasdi Baydka Xurmaysan, iyagoo Dooni Fadliga Eebahood iyo Raali ahaanshihiisa, Markaad Xalaalowdaanna (Dhamaysaan Xajka iyo Cumrada) Ugaadhsada (hadaad Doontaan) yeyna Idin ku Xambaarin Cadhada Qoom idinka Celiyey Masaajidka Xurmaysan inaad Xad gudubtaan, Isugu kaalmeeya Samaha iyo Dhawrsiga hana Isugu Kaalmaynina Dambi iyo Colnimo, kana Dhawrsada Eebe, Ilaahay way darantahay Cigaabtiisu.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا ءَوْفُوا بِالْعُقُودِ أَحْلَيْتُمْ لَهُمْ نَهِيمَهُ
الَّذِينَ ءَامَنُوا بِمَا نَزَّلْنَا عَلَيْكُمْ ءَايَاتِنَا مِنَّا وَالصَّيْدِ
وَأَنشُرْ حُرْمَتَنَا إِنَّ اللَّهَ يَحْكُمُ مَا يُرِيدُ ﴿١﴾

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَحْلُوا شَعِيرَةَ اللَّهِ
وَلَا أَنشُرْ الْحُرْمَةَ وَلَا الْهَدْيَ وَلَا الْقَلَائِدَ وَلَا ءَاتِينَ
الْبَيْتِ الْحَرَامِ يَتَّبِعُونَ فَضْلًا مِّن رَّبِّهِمْ وَرِضْوَانًا وَإِذَا
حَلَلْتُمْ فَاصْطَادُوا وَلَا يَجْرِمَنَّكُمْ شَنَا نُ قَوْمٍ أَن صَدَّقُوا
عَنِ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ أَن تَعْتَدُوا وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ
وَالتَّقْوَىٰ وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ
وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿٢﴾

Suuraddan waxaa la Dhahaa Suuratul Maa'ida, waxayna Kulmisatay Xukumo badan, Aayadahanna wuxuu Eebe Fari Dadka inay Oofiyaan Ballamada wuxuuna u Caddeeyey in loo Banneeyey Cunnada Xoolaha marka laga Reebo waxa lagu Akhriyey iyo Ugaadhsiga iyagoo Xarman, Wuxuuna ku Booriyey inayna ku Xad gudbin kuna Dacatiyin, Calaamadda Eebe iyo waynaantiisa, iyo Bisha Xurmaysan, iyo Hadyada la Calaameeyey iyo kuwa ku Socda Guriga Xurmaysan, iyagoo Dooni Khayrka Eebe iyo Raalli ahaanshihiisa, markay Xalaaloobaanna way Ugaadhsan karaan, mana Haboona in Caddaaladda sina looga Tago, waase in khayrka laysugu Kaalmeeyo oon Xumaanta laysugu kaalmaynin, Illeen waxaa daran Cigaabta Eebe.

Caa'isha waxay Tidhi: Suuraddan waa wixii u Digid Dambeeyey ee waxay Banaysana Cuna waxay Reebtana Daaya. Iyo Waxay kala gataan ama ku Heshiyaan. Al-Maa'idah (1-2).

3. Waxaa laydinka Xarrimay Bakhtiga iyo dhiigga iyo Hilibka Doofaarka iyo wixii lagu Xuso (Lagu Gawraco) waxaan magaca Eebe ahayn, iyo tii la Ceejiyo, iyo la Ganac gooyo, iyo tan meel ku dhacda, iyo Tii la Hardiyo, iyo Midduu Cunay bahal, waxaad Gawracdaan mooyee (waxaa kaloo reeban) wixii lagu gawraco Sanam, iyo inaad ku Nasiib doontaan Faal, kaasi waa Fisqi, maantayna ka quusteen kuwii Gaaloobay Diintiinna, Ee ha ka Cabsanina ee iga Cabsada, Maantaan idiin kaamilay (Dhameeyey) Diintiinna waxaana idiin Taamyelay Korkiinna Nicmadayda waxaana idiinka Raalli noqday Islaamka Diin ahaan, Ciddii loo Dhibaateeyo Baahi inay cunaan wixii laga xaaraameeyey oon Falayn Dambi Eebe waa dambi dhaafe Naxariista.

4. waxay ku warsan maxaa loo Xalaa-leeyey waxaad dhahdaa waxaa laydiin xallilay Wanaagga (Xalaasha) iyo waxaad wax bardeen oo wax Dhaawaca idinkoo ku ugaadhsan, ood baraysaan wuxuu idin baray Eebe ee ka cuna waxay idiin qabtaan ku Xusana Magaca Eebe kana Dhawrsada Eebe, Ilaahay waa deg degtaa Xisaabtiisuye.

waxa wax Dhiboo dhan Eebe wuu Reebay, Sida Bakhtiga, Dhiigga, Hilibka Doofaarka iyo wixii Magaca Eebe waxaan ahayn lagu Gawracay, waxaa si Gaar ah loo Sheegay inay Reebantahay tan la Ceejiyo, tan la ganac gooyo, tan Meel ka dhacda, Tan hardida ku Dhimata, tan bahal Cuno oon la Gawricin, waxaa kaloo Reeban waxa Sanamyada loo Gawraco iyo waxyaalo la Taagay, iyo wax lagu sameeyo Faal, waxaasuna waa Faasiqnimo, Maalintaas yeyna ka quusteen Gaaladu Diinta Islaamka, mana mudna in laga Cabsado ee waa in Eebe uun laga Cabsado, Eebana wuu Taam yeelay Diinta Islaamka ah iyo Nicmadiisa, wuxuuna inooga raalli noqday Diinta Islaamka waxa ka soo hadhayna waa wax kama jiraan, Ciddiise Baahata oon Xadgudbin Eebe waa u dhaafe Naxariista. Al-Maa'idah (3-4).

5. Maanta waxaa Laydiin Xalaa-leeyey Wanaagga, Cunnada kuwa la siiyey Kitaabna Xalaaalbuu idiin yahay, Cuna-

حُرِّمَتْ عَلَيْكُمْ أَيْمَانُ يَوْمَئِذٍ وَاللَّهُمَّ وَحُرْمَةُ الْخَيْزِيرِ وَمَا أَهْلَ
لِعَيْرِ اللَّهِ بِهِ وَالْمُنْخَفَةَ وَالْمَوْجُوذَةَ وَالْمُرْدِيَةَ
وَالنَّطِيحَةَ وَمَا أَكَلَ السَّمْعُ إِلَّا مَا ذَكَّيْتُمْ
وَمَا ذُبِحَ عَلَى النُّصُبِ وَأَنْ تَسْتَقْسِمُوا بِالْأَزْلَمِ
ذَلِكَ فَمَنْ فَعَلَ فَأَنَّ يَوْمَ يَدْعَى الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ دِينِكُمْ فَلَا
تَخْشَوهُمْ وَأَخْشَوْنَا الْيَوْمَ أَكَلْتُمْ لُحْمَكُمْ وَسَفَّيْتُمْ
عَلَيْكُمْ نَفْسِي وَرَضَيْتُمْ لَكُمْ الْإِسْلَامَ دِينًا قَبْلَ
أَضْطَرَّ فِي مَخْصَصَةٍ غَيْرِ مُتَجَانِفٍ لِإِثْمٍ فَإِنَّ اللَّهَ
عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٣﴾

يَسْأَلُونَكَ مَاذَا أُحِلَّ لَهُمْ قُلْ أُحِلَّ لَكُمْ الْطَّيِّبَاتُ
وَمَا عَلَّمْتُمْ مِنَ الْحَوَالِجِ مُكَلِّبِينَ نَعَمُونَ هُنَّ وَمَا
عَلَّمَكُمُ اللَّهُ فَكُلُوا مِمَّا أَمْسَكْنَ عَلَيْكُمْ وَاذْكُرُوا أَسْمَ اللَّهِ
عَلَيْهِ وَأَنْقُوا لِلَّهِ إِنَّ اللَّهَ سَرِيعُ الْحِسَابِ ﴿٤﴾

أَيُّومٍ أُحِلَّ لَكُمْ الطَّيِّبَاتُ وَطَعَامُ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ
حَلَّ لَكُمْ وَطَعَامُكُمْ حَلَّ لَهُمْ وَالْمُحْصَنَاتُ مِنَ

diinuna xalaalbay u tahay, iyo kuwa Dhawrsoon oo Mu'minaadka ah (Guurkooda) iyo kuwa Dhawrson oo ka Mid ah kuwa la siiyey Kitaabka oo idinka horreeyey haddaad siisaan ujuuradooda (Meherkooda) iyagoo Dhawrson oon Xumaan (Zino) Samaynayn Yeelanaynna Saaxiibbo (Xun) Ciddii ka Gaalowda Iimaanka wuu Hoobtay Camalkiisu wuxuuna ka mid noqon aakhiro kuwa Khasaaray.

6. Kuwa (xaqa) Rumeeyow Haddaad u Kacdaan Salaadda Dhaqa Wajiyadiinna, iyo Gacmihiinna Tan iyo Jiqilka (Xusulka) Masaxana Madaxiinna (Dhaqana) Lugihiina Tan iyo anqawyada haddaad Janaabo qabtaan isdaahiriya, Haddaad Buktaan ama Safartihiin ama ka timaadaan Kortag ama Istaa-bataan haween oydaan helayn Biyo ku Gagabaysta dhul daahir kuna Masaxa Wajigiinna iyo Gacmihiinna, idin lama doonayo Eebe inuu idin yeelo korkiinna Dhib wuxuuse dooni inuu idin Daahiriyo idiin dhammeeyo Nicmadiisa korkiinna inaad Shugridaan Darteed.

الْمُؤْمِنَاتِ وَالْمُحْصَنَاتِ مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِكُمْ إِذَا آتَيْتُمُوهُنَّ أَجْرَهُنَّ مُحْصِينَ عَوْرَتِ مُسْلِمِينَ وَلَا مَخْذِيئًا أَخْدَانًا وَمَنْ يَكْفُرْ بِالْإِيمَانِ فَقَدْ حَبِطَ عَمَلُهُ وَهُوَ فِي الْآخِرَةِ مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٥﴾

يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذَا قُمْتُمْ إِلَى الصَّلَاةِ فَاغْسِلُوا وُجُوهَكُمْ وَأَيْدِيَكُمْ إِلَى الْمَرَافِقِ وَامْسَحُوا بِرُءُوسِكُمْ وَأَرْجُلَكُمْ إِلَى الْكَعْبَيْنِ وَإِنْ كُنْتُمْ جُنُبًا فَاطَّهَّرُوا وَإِنْ كُنْتُمْ مَرْضَىٰ أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ أَوْ جَاءَ أَحَدٌ مِنْكُم مِّنَ الْمَاءِ طَيْبًا فَلَمْ تَجِدُوا مَاءً فَتَيَمَّمُوا صَعِيدًا طَيِّبًا فَامْسَحُوا بِوُجُوهِكُمْ وَأَيْدِيكُمْ مِنْهُ مَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيَجْعَلَ عَلَيْكُمْ مِنْ حَرَجٍ وَلَٰكِنْ يُرِيدُ لِيُطَهِّرَكُمْ وَلِيُتِمَّ نِعْمَتَهُ عَلَيْكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٦﴾

Halkan wuxuu Eebe ku sheegay in loo Banneeyey Mu'miniinta Cunnada Xalaasha ah, iyo Cunnada kuwa Kitaabka leh, iyo Haweenka Dhawrsoon oo Mu'miniinta ah, iyo kuwa Kitaabka leh ee naga horeeyey marka la siiyo maherkooda ee dhawrsoon, Ciddiise xaqa iyo Iimaanka ka Gaalowda waa mid buray Camalkiisu oo khasaaray.

Sayid Cumar waxaa laga Sheegay: waxaan doonay inaan u ogolaan Ruux Xumaan (Zino) Sameeyey inuu Guursado haweenay Dhawrsoon, Aayadda kale waxay ka warrami Waysada iyo in la dhaqi Wajiga, Gacmaha tan iyo Jiqillada, madaxana la masixi, Lugahana la dhaqi tan iyo Anqawyada, Janaabadana laga maydhan, ciddii Jiran ama Safar ah ama Kortag ka timid ama haween Taabta oon Biya helinna inuu Carrada ku Gagabaysan oo marin Wajiga iyo Gacmaha, waana Fududayn Eebe iyo inuu idiin Muujiyo Nicmadiisa iyo inaan ku mahdinno. Al-Maa'idah (5-6).

7. Xusuusta Nicmada Eebe iyo Ballankiisa uu idin kula Ballamay markaad Dhaheen waan maqalay waana adeecnay kana Dhawrsada Eebe Illeen Ilaa-

وَأَذْكُرُوا نِعْمَةَ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَمِيثَاقَهُ الَّتِي وَآتَقْتُمْ بِهِ إِذْ قُلْتُمْ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأَتَقُوا

hay waa Ogyahay waxa Laabta ku Sugane.

8. Kuwa (xaqa) rumeeyow Noqda kuwa Istaaga (u Darban) dar eebe oo ku marag kaca Caddaalad yeyna idinku Xambaarin Cadhada qoom inaydaan Caddaalad falin, Caddaalad fala iyadaa u dhaw Dhawrsashada (Eebe) kana Dhawrsada Ilaahay, Eebe waa Ogyahay waxaad falaysaane.

9. Wuxuu u Yaboohay Eebe kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican inuu u sugnaaday Dambi dhaaf iyo Ajir wayn.

10. Kuwa Gaaloobay oo Beeniyey Aayaadkanaga kuwaasu waa Asaxaabta (Ehelka) Jaxiimo.

11. Kuwa (xaqa) Rumeeyow Xusuusta Nicmada Eebe korkiinna markay Hamiyeen "dooneen" qoom inay idinku Fidiyaan (Xumaan) Gacmahooda oo (Eebe) idinka reebay Gacmahooda Xaggiina kana Dhawrsada Eebe, Ilaahayna ha tala Saarteen Mu'miniintu.

اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ عَلَيْهِ يَدَاتِ الصُّدُورِ ﴿٧﴾

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا كُونُوا قَوْمِ اللَّهِ سُهْدَةً
بِالْقِسْطِ وَلَا تَجْرِمَنَّكُمْ شَنَا نُ قَوْمِ عَلَى
أَلَّا تَعْدِلُوا أَعْدِلُوا هُوَ أَقْرَبُ لِلْقَوِيَّةِ وَاتَّقُوا اللَّهَ
إِنَّ اللَّهَ خَبِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿٨﴾

وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ
لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿٩﴾

وَالَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا أُولَٰئِكَ
أَصْحَابُ الْجَحِيمِ ﴿١٠﴾

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا أَذْكُرُوا نِعْمَتَ اللَّهِ
عَلَيْكُمْ إِذْ هَمَّ قَوْمٌ أَن يَبْسُطُوا إِلَيْكُمْ
أَيْدِيَهُمْ فَكَفَّ أَيْدِيَهُمْ عَنْكُمْ وَاتَّقُوا اللَّهَ وَعَلَى
اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

Aayadahan wuxuu Eebe fari Dadka Mu'miniinta ah inay Xusuustaan Nicmadiisa oo ah inuu u soo Dejiyey Sharcigan toosan, una soo Diray Rasuul, iyo Ballankii uu ka qaaday inay xaqa u gargaaraan oyna Aqbaleen, iyo inay Eebaha wax walba og ka Dhawrsadaan, waxaa kale oo uu faray inay Caddaaladda ku Dadaalaan Xaataa Dadkay Colka Yihiin Saasaana u Dhaw Xaqa iyo Wanaagga, markaasuu Eebe Caddeeyey abaalka kuwa wanaagga fala iyo kuwa Gaaloobay, iyo in eebe ka Dhawray Cadaw isku dayey inay Xumaan ku falaan, oyna Mudanyihiin inay Eebe tala saartaan, waxaa Sugnaatay inay Muslimiinti la Ballantemeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Si kastoo Yihiinba inay xaqa u Gargaaraan. Eebana waa kan kadhawray Nabiga Cadowgii isku Dayey inuu wax yeeleeyo Yuhuud iyo Kuwa kalaba. Al-Maa'idah (7-11).

12. Dhab ahaanbuu u qaaday Eebe Ballanka Bani'Israa'iil, waxaana ka Bixinay Xaggooda Labo iyo toban Madax ah, wuxuuna Yidhi Eebe anagu waan idin la jiraa Haddaad Oogtaan Salaadda oo Bixisaan Zakada ood Rumaysaan Rasuuladayda, ood una Gargaartaan oo amaah gashataan Eebe amaah (Sadaqo) Fiican waxaan ka

*وَلَقَدْ أَخَذَ اللَّهُ مِيثَاقَ بَنِي إِسْرَائِيلَ وَبَعَثْنَا
مِنْهُمُ اثْنَيْ عَشَرَ نَقِيبًا وَقَالَ اللَّهُ إِنِّي
مَعَكُمْ لَئِنْ أَقَمْتُمُ الصَّلَاةَ وَآتَيْتُمُ
الزَّكَاةَ وَآمَنْتُمْ بِرُسُلِي وَعَزَّرْتُمُوهُ
وَأَقْرَضْتُمُ اللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا لَأُكَفِّرَنَّ عَنْكُمْ
سَيِّئَاتِكُمْ وَلَأُدْخِلَنَّكُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ

Asturi Xaggiinna Xumaanta waxaana idin galin Jannooyin ay Dureeri Dhexdeeda Wabiyaal Ruuxii Gaalooaba intaas ka Dib oo idin Ka mid ah wuxuu ka Dhumay Jidka Toosan.

ثُمَّهَا الْأَنْهَارُ فَمَنْ كَفَرَ بَعْدَ ذَلِكَ مِنْكُمْ
فَقَدْ ضَلَّ سَوَاءَ السَّبِيلِ ﴿١٣﴾

13. Burintooda Ballankooda (Yuhuud) yaan u Lacnadnay kana Yeellay Quluubtooda mid Ingagan, iyagoo ka leexin Kalimada meesheeda waxayna halmaameen qayb ka mid ah wixii lagu waaniyey kamana waydid Xaggooda inaad ku aragtid Khayaamo wax yar mooyee ee iska Cafi iskana Saamax Eebe wuxuu Jecelyahay samo Falayaashee.

فَمَا تَقْضِيهِمْ مِيثَاقَهُمْ لَعَنَّاهُمْ وَجَعَلْنَا
قُلُوبَهُمْ قَاسِيَةً يُحَرِّفُونَ الْكَلِمَ عَنْ
مَوَاضِعِهِ وَنَسُوا حَظًّا مِمَّا ذُكِّرُوا بِهِ
وَلَا تَزَالُ تَطَّلِعُ عَلَى خَآئِنَةٍ مِنْهُمْ إِلَّا قَلِيلًا
وَهُمْ فَأَعْيُ عَنْهُمْ وَأَصْفَحَ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ
الْمُحْسِنِينَ ﴿١٣﴾

Halkanna wuxuu Eebe ka Qisoon Bani Israa'iil iyo in Eebe ka Soo Saaray Labo iyo Toban Madax ah kuna Yidhi waan idinla Jiraa haddaad Oogtaan Salaadda, oo Bixisaan Zakada, ood Rumaysaan Rasuuladayda, ood U gargaartaan ood wanaag Eebe Amaahsataan, uuna Asturi Xumaantooda uuna galin Jannooyin ay Dureeri Dhexdeeda Wabiyaal, Ciddiise ka dib Gaalowda wuxuu ka Dhumay Jidka Toosan. waase la Lacnaday Qalbi ingeegooda iyo ka Leexinta hadalka meelhiisa, waxayna halmaameen wax badan oo lagu waaniyey, Khayaamana lagama waayo Badankooda, ee iska Dhaaf hana ku dhibin naftaada Eebe wuxuu jecelyahay Samafaleyaashee.

waana taas Dabeecadda Yuhuud iyo wixii la mid ah, Waxaase waajib ah in laga Digtoonaadaa layskuna dayo in la toosiyo. Al-Maa'idah (12-13).

14. Kuwa Yidhi waxaan nahay Nasaara waxaan ka qaadnay Ballankooda waxayna halmaameen qayb wixii lagu Waaniyey, markaasaan ku sii daynay Dhexdooda Colnimo iyo Cadho Tan iyo Maalinta Qiyaame, wuuna uga warrami Eebe waxay Samaynayeen.

وَمِنَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّا نَصْرِي أَخَذْنَا مِيثَاقَهُمْ
فَنَسُوا حَظًّا مِمَّا ذُكِّرُوا بِهِ فَأَغْرَيْنَا
بَيْنَهُمُ الْعَدَاوَةَ وَالْبَغْضَاءَ إِلَى يَوْمِ
الْقِيَامَةِ وَسَوْفَ يُنَبِّئُهُمُ اللَّهُ بِمَا كَانُوا
يَصْنَعُونَ ﴿١٤﴾

15. Ehelu Kitaabow waxaa idiin Yimid Rasuulkannaga oo idiin Caddayn wax badan ood ahaydeen kuwo ka qariya Kitaabka (Tawreed) wuxuuna idinka Cafiyi wax badan, waxaana idiinka Yimid Xagga Eebe Nuur iyo Kitaab Cad.

يَا أَهْلَ الْكِتَابِ قَدْ جَاءَكُمْ رَسُولُنَا
يُبَيِّنُ لَكُمْ كَثِيرًا مِمَّا كُنْتُمْ
تُخْفُونَ مِنَ الْكِتَابِ وَيَعُوذُونَ بِكثِيرٍ
قَدْ جَاءَكُمْ مِنَ اللَّهِ نُورٌ وَكِتَابٌ
مُبِينٌ ﴿١٥﴾

16. Una ku Hanuuniyo Eebe Ruuxii Raaca Raalli ahaanshihiisa Jidka Nabadgalyada kana bixin Mugdiyada una bixin Xagga Nuurka Idinkiisa kuna hanuunin jidka Toosan.

يَهْدِي بِهِ اللَّهُ مَنِ اتَّبَعَ رِضْوَانَهُ مَوْجِبَةً
السَّلَامَ وَيُخْرِجُهُمْ مِنَ الظُّلُمَاتِ إِلَى
النُّورِ بِإِذْنِهِ وَيَهْدِيهِمْ إِلَى صِرَاطٍ
مُسْتَقِيمٍ ﴿١٦﴾

17. Waxaa Gaaloobay kuwa yidhi Eebe waa uun Masiixi Ibnu maryama, yaa uga hanan Eebe waxba hadduu doono inuu Halaago Masiixi Ibnu Maryama iyo Hooyadiis iyo waxa Dhulka ku sugan Dhammaan, Eebaa iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, iyo waxa u Dhaxeeya, wuxuuna abuuraa wuxuu Doono Eebana wax kasta wuu karaa.

لَقَدْ كَفَرَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ هُوَ
الْمَسِيحُ ابْنُ مَرْيَمَ قُلْ فَمَنْ يَمْلِكُ مِنَ
اللَّهِ شَيْئًا إِنْ أَرَادَ أَنْ يُهْلِكَ الْمَسِيحُ
ابْنُ مَرْيَمَ وَأُمَّهُ وَفِي الْأَرْضِ
جَمِيعًا وَاللَّهُ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ
وَمَا يَتَّبِعُهُمَا يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ
شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٧﴾

Kuwa sheegta inay Nasaara yihiin wuxuu Eebe ka qaaday ballan inay Rumeeyaan una Gargaaraan Nabiga Muxamad ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wayse Halmaameen oo iska diideen arrintaas, markaasaa Eebe Dhexdhigay Col iyo Cadho Tan iyo Qiyaame, Eebana wuu uga warrami oo ka abaal marin waxay falayeen.

Ehelu Kitaabkow waxaa idiin yimid Rasuulka Eebe oo idiin Caddayn wax Badan ood qarinaysaan, idinka cafin wax badan, xagga Eebana waxaa idiinka Yimid Nuur iyo quraan Cad kuna Hanuuniyo Eebe Jidka Nabadgalyo Ciddii Raacda Raalli ahaanshihiisa, iyo Jidka Nuurka ah ee Toosan.

Waxaa Dhab u Gaaloobay kuwa Yidhi Eebe waa Ciise Ibnu Maryama, Yaase Eebe ka Celin Hadduu Halaago Ciise iyo Hooyadiis iyo waxa Dhulka ku sugan Dhammaan Xukunka Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa Udhaxeeyana Eebaa Iska leh wuxuu Doona Yuu abuuraa, wax walbana wuu karaa, Eebana waa kali Awoodleh. Al-Maa'idah (14-17).

18. Waxay Dheheen Yuhuud iyo Na-saaraba anagu waxaan nahay Caruur Eebe iyo kuwuu Jecelyahay waxaad Dhahdaa Muxuu idiinku Cadaabaa dambigiinna saas ma aha ee waxaad Tihiin Dadka Eebe Abuuray, wuu u Dhaafi Cidduu Doono wuuna Cadaabi Cidduu Doono, Eebana waxaa u sugnaaday Xukunka Samooyinka, iyo Dhulka iyo waxa u Dhexeeya Xaggiisaana loo ahaan.

وَقَالَتِ الْيَهُودُ وَالنَّصَارَى نَحْنُ أَبْنَاءُ
اللَّهِ وَأَحِبُّونَهُ قُلْ فَلِمَ يُعَذِّبُكُمْ بِذُنُوبِكُمْ بَلْ أَنْتُمْ
بَشَرٌ مِمَّنْ خَلَقَ يَعْذِّبُ لِمَنْ يَشَاءُ وَيُعَذِّبُ مَنْ
يَشَاءُ وَاللَّهُ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا
وَإِلَيْهِ الْمَصِيرُ ﴿١٨﴾

19. Ehelu Kitaabow waxaa idiin Yimid Rasuulkanagii isagoo Idiin Caddayn Muddo (kadib) rassulada inaydaan

يَا أَهْلَ الْكِتَابِ قَدْ جَاءَكُمْ رَسُولُنَا يُبَيِّنُ لَكُمْ عَلَى
فَتْرَةٍ مِمَّن الرُّسُلِ أَنْ تَقُولُوا مَا جَاءَنَا مِن بَشِيرٍ

dhihin nooma Imaan Bishaareeye iyo Dige, Eebana wax kasta wuu karaa.

وَلَا تَبْتَئِرْ فَقَدْ جَاءَ كَرِيمٌ بَشِيرٌ وَنَذِيرٌ ۗ وَاللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٨﴾

20. (Xusuuso) Markuu ku Yidhi (Nabi) Muuse Qoomkiisa, Qoomkayow Xusuusta Nicmada Eebe ee korkiinna markuu yeelay Dhexdiinna Nabiyo idinkana yeelay Xukaam idinsiiyeyna waxaan la siin Cid Caalamka ah, (Waqtiigiinnii).

وَلَمَّا قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ إِنِّي عُذْتُ بِالرَّبِّ الْعَلِيِّمِ ۗ وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِذُنُوبِكُمْ ۗ فَذَكَرُوا نِعْمَةَ اللَّهِ عَلَيْهِمْ إِذْ جَعَلَ فِيكُمْ أَنْبِيَاءَ وَجَعَلَ لَكُمْ مَلُوكًا ۗ وَأَنْتُمْ كَرُمًا لَمْ تَرْيُوتَ أَحَدًا مِنَ الْعَالَمِينَ ﴿٢٠﴾

21. Qoomkayow gala Dhulka la Daahiriyey oo idiinyaboohay Eebe hana u noqonina Gadaashiinna oo gadoontaan idinkoo Khasaaray.

يَقُولُوا ادْخُلُوا الْأَرْضَ الْمُقَدَّسَةَ الَّتِي كَتَبَ اللَّهُ لَكُمْ وَلَا تَرْتَدُّوا عَلَىٰ أَدْبَارِكُمْ فَتَنْقَلِبُوا خَاسِرِينَ ﴿٢١﴾

Yuhuud iyo Nasaara iyo Gaaladaba waxay ku Hadlaan Haddallo Xun, Siday halkan ku sheegeen inay yihiin Caruurtii Eebe, iyo kuwo uu Jecelyahay, Taasis waa Been ee waa Dad ka mid ah khalqiga uu abuuray, wuuna Cadaabi Eebana wuu ka deegtoon yahay Khalqiga, waxaana u sugnaaday Cirka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya Xaggiisaana loo ahaan.

Waxaana idiin soo diray Rasuulkanaga Muddo Rasuulada Ka dib, Saydaan u Dhihin nooma imaan Bishaareeye iyo Dige, wuuse idiin yimid, Nabi Muusena wuu waaniyey Banii Israa'iil wuxuuna Xusuusiyey Nicmada Eebe iyo Nabiyada uu u soo diray kana yeelay Xukaam waqtigoodii, wuxuuna faray inay Galaan Dhulka daahirka ah Qudsi. waxaana wax laga xishooda ah Magaaladaas Barakaysan ay Gaalada Yahuuddu ay xoog ku qabsadeen. Dhulka Eebaa leh, waxaana xaq u leh inuu ku noolaado Muslim Mu'min ah, waana inay ku soo noqoto Qudsi Gacanta Muslimiinta. Al-Maa'idah (18-21).

22. Waxay dheheen Muusow waxaa (Dhulka) Dhexdiisa ah qoom daran mana galayno intay ka baxaan xaggeeda hadday ka baxaanna waanu gali.

قَالُوا يَا مُوسَىٰ إِنَّا فِيهَا قَوْمٌ جَبَّارِينَ وَإِنَّا لَنَنذِرُكَ عَنْهَا وَعَنْ عَابِدَيْهَا إِذْ أَخَذْنَا مِنَ النَّبِيِّينَ مِيثَاقَهُمْ لَعَنَّاهُمْ فَسَلَوْنَ كَسَبَتُهُمْ عَنْهُ وَعَلَىٰ رَبِّكَ عُذْرَتٌ كَثِيرَةٌ ﴿٢٢﴾

23. waxay Dheheen Labo Nin oo ka mid ah kuwa ka Cabsada (Eebe) una Nicmeeyey Eebe uga gala albaabka Markaad gashaan idinkaa Adkaane, Eebana tala saarta haddaad Mu'miniin tihiin.

قَالَ رَجُلَانِ مِنَ الَّذِينَ يَخْفَوْنَ أَنَّ اللَّهَ عَلَيْهِمَا إِذْ أَخَذُوا عَلَيْهِمُ الْبَابَ إِذْ أَخَذْنَا مِنْهُمُ الْفَيْءَ فَأَخَذُوا مِنْهُمُ الْمَوْتِ وَأَخَذُوا مِنْهُمُ الْغُلُوبَ ۗ وَاللَّهُ فَتَوَكَّلْ عَلَىٰ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿٢٣﴾

24. Waxay dheheen Muusow anagu ma galayno Waligeed intay joogaan ee taga adiga iyo Eebaha oo la dagaalama anagu halkanaan Fadhiyeynaaye.

قَالُوا يَا مُوسَىٰ إِنَّا لَنَنذِرُكَ أَنَّهَا أَرْضٌ كَافِرَةٌ ۗ فَادْعُ إِلَىٰ سَبِيلِ رَبِّكَ فَقَدْ جَاءَكَ الْبَيِّنَاتُ ۗ وَاللَّهُ فَتَوَكَّلْ عَلَىٰ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuu yidhi (Nabi) Muuse Eebow ma hanto Naftayda iyo Walaalkay Mooyee ee nakala Bixi (Xukun) Dhexdannada iyo Qoomka Faasiqiinta ah (Xun).

قَالَ رَبِّ إِنِّي لَا أَمْلِكُ إِلَّا نَفْسِي وَأَجْيَ قَافِرًا
بَيْنَنَا وَبَيْنَ الْقَوْمِ الْفَاسِقِينَ ﴿١٥﴾

26. (Eebe) Wuxuu Yidhi iyadu "Dhulka" waa ka Xaaraan korkooda Afartan Sano oy ku Wareeri Dhulka ee haw Murugoon qoomka Faasiqiinta ah.

قَالَ فَإِنَّهَا مُحَرَّمَةٌ عَلَيْهِمْ أَرْبَعِينَ سَنَةً يَتِيهُونَ
فِي الْأَرْضِ فَلَا تَأْسَ عَلَى الْقَوْمِ
الْفَاسِقِينَ ﴿١٦﴾

Mana habboona in Fulayadii Diiday Inay Galaan Qudsi waqtigii Nabi Muuse iyo kuwa ka Liita ay Xoog ku qabsadeen Magaaladaas.

Waxaase lagaga Kicin karaa in Dhab ahaan xaqa loo Rumeeyo Jidka Eebana Dhab loogu Jahaado, Muslimiintuna isku mid noqdaan, Iyagoo ku Toosan Sharciga Eebe ee Wanaagsan, haddii kale waxaa ku Dhici Muslimiinta wareerkii ku Dhacay Banii Israa'iil, waana looga Adkaan Dhulka waxayna noqon kuwo ka baxay Daacada iyo Sharciga Eebe, wax loo murugoodana noqon maayaan, Sidii Eebe u Sheegay Nabi Muuse, waana in laga leexdo Wadada Yuhuud. Al-Maa'idah (22-26).

27. Ku Akhri Korkooda warka Labadii Wiil ee Ilmo Nabi aadam ahayd si dhab ah, markay Dhaweeyeen (Sadaqaysteen) Sadaqo oo laga Aqbalay Midkood lagana aqbalin kii kale, oo uu Yidhi waan ku Dili uu Yidhi (Kii kale) wuxuu uun Eebe ka aqbalaa kuwa Dhawrsada.

* وَأَتَلَّ عَلَيْهِمْ نَبَأَ آدَمَ بِالْحَقِّ إِذْ قَرَّبَا قُرْبَانًا
فَتُضِلَّ مِنْ أَحَدِهِمَا وَلَمْ يُتَقَبَلْ مِنَ الْآخَرِ
قَالَ لَأَفْتُنَّكَ قَالَ لَأَمَّا يُتَقَبَلُ اللَّهُ مِنَ
الْمُتَّقِينَ ﴿١٧﴾

28. Haddaad u soo Fidiso Xaggayga Gacantaada inaad I disho anigu kugu Fidin maayo gacantayda inaan ku dilo Anigu waxaan ka Cabsan Ilaahay ee ah Eebaha Caalamka.

لَيْنَ بَسَطْتَ إِلَى يَدِكَ لِتَقْتُلَنِي مَا أَنَا بِبَاسِطِ يَدِي
إِلَيْكَ لِأَقْتُلَنَّكَ إِنِّي أَخَافُ اللَّهَ رَبَّ الْعَالَمِينَ ﴿١٨﴾

29. Waxaana Dooni inaad la Noqoto Dambigayga iyo kaagaba ood noqoto Naarta Ehelkeeda Taasina waa Abaal-ka Daalimiinta.

إِنِّي أُرِيدُ أَنْ تَبْوَأَ بَيْتِي وَأَنَا مَكُونٌ مِنْ
أَصْحَابِ النَّارِ وَذَلِكَ جَزَاءُ الظَّالِمِينَ ﴿١٩﴾

30. Markaasay u qurxisay Naftiisii Dilka Walaalkiis Wuuna Dilay wuxuuna Noqday kuwa Khasaaray.

فَطَوَّعَتْ لَهُ نَفْسُهُ وَقَتْلَ أَخِيهِ فَقَتَلَهُ فَأَصْبَحَ
مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٢٠﴾

31. Wuxuuna Eebe u Bixiyey (Mu-

فَبَعَثَ اللَّهُ غُرَابًا يَبْحَثُ فِي الْأَرْضِ لِيُرِيَهُ كَيْفَ

jiyey) tuke Faadhi Dhulka inuu Tusiyo siduu u Asturo Maydka Walaalkiis, wuxuuna Yidhi Shalaytee miyaan ka Cajisay inaan noqdo Sida Tukahan oon Asturo Maydka Walaalkay wuxuuna ahaaday mid Qoomamooda.

يُؤَارِي سَوْءَةَ أَخِيهِ قَالَ نُؤْيَلِيْ اَعْمَزْتُ اَنْ
اَكُوْنَ مِثْلَ هٰذَا الْعَرَابِ فَاُوْرِيْ سَوْءَةَ اَخِي
فَاَصْبَحَ مِنَ التَّذَمِّيْنَ ﴿١١﴾

Aayadahani waxay ka warami wixii dhex maray Labadii Wiil ee Nabi Aadam oo ahaa Mid Fiican iyo Mid Xun, kaasoo xasad iyo Gardarro u Dilay Walaalkiis in Eebe ka Aqbalay Sadaqadii, wuxuuna u sheegay inuusan isagu Rabin inuu Dilo Naf xaq darro, maxaayeelay Ciddii taas fasha waa mid daalim ah oo gali Naarta, markuu dilay Walaalkiisna wuu Khasaaray wuxuu falana wuu Garanwaayey intuu ka arko Tuke Qodi Dhulka, Markaasuu ku dayday si uu u Asturo una qariyo maydka walaalkiis isagoo qoomamayn, Kaasuna waa Xasad iyo Shaydaan Taladii iyo Dilkii Xaq darro ee u Horreeyey. waxaana Sugnaatay inuu Naf kasta oo Xaq Darro loo Dilo uu qayb ku Yeelan Wiilkaas. Illeen Isagaa Jideeyey Dilkee. Saas Darteed waa in laga Fogaado Dil Xaq Darro ILLeen Abaalkiisu waa Naare. Al-Maa'idah (27-31).

32. Saas Darteed yaan ugu Jidaynay Banii-Israa'iil Cidii Disha Naf aan (Dilin) Naf ama Fasaadin Dhulka waxay la mid tahay inuu Dilay Dadka Dhammaan, Ciddii Noolaysa Nafna (Korisa) Waxay la mid Tahay Isagoo Nooleeyey Dadkoo Dhan, Waxay ula Timid Rasuuladanadii Xujooyin Markaas in Badan oo ka mida Intaas ka dib Dhulkay ku Xadgudbeen.

مِنْ اَجْلِ ذٰلِكَ كَتَبْنَا عَلٰى سَبِيْ اِسْرٰءِيْلَ اَنَّهُ
مَنْ قَتَلَ نَفْسًا بِقَدْرِ نَفْسِهَا فَاَوْسَدٰى فِي الْاَرْضِ
فَكَأَنَّمَا قَتَلَ النَّاسَ جَمِيْعًا وَمَنْ اٰخِيَاهَا
فَكَأَنَّمَا اٰخِيَا النَّاسَ جَمِيْعًا وَلَقَدْ جَاءَهُمْ
رُسُلُنَا بِالْبَيِّنٰتِ ثُمَّ اِنَّمَا كَثَرٰ كُفْرُهُمْ
بَعْدَ ذٰلِكَ فِي الْاَرْضِ لَمُسْرِفُوْنَ ﴿٢٢﴾

33. Abaalka kuwa la Dagaalama Eebe iyo Rasuulkiisa oo la Socda Dhulka Fasaad waa in la Dilo ama la Wadho, ama loo gooyo Gacmahooda iyo Luga-hooda Isdhaaf, ama laga Fogeeyo Dhulka, arrintoodaasna waa inay Mudanyihiin Dulli Adduun iyo Aakhiro oo Cadaab Wayna.

اِنَّمَا جَزَاؤُا الَّذِيْنَ يَحَارِبُوْنَ اِلٰهَ وَرُسُلَهُ
وَيَسْعَوْنَ فِي الْاَرْضِ فَسَادًا اَنْ يُقْتَلُوْا
اَوْ يُصَلَّبُوْا اَوْ يُقَطَّعْ اَيْدِيهِمْ وَاَرْجُلُهُمْ مِنْ
خَلْفٍ اَوْ يُنْفَخُوْا مِنَ الْاَرْضِ ذٰلِكَ لَهُمْ
جَزَاؤُا الَّذِيْنَ اٰمَنُوْا وَلَهُمْ فِي الْاٰخِرَةِ عَذَابٌ
عَظِيْمٌ ﴿٢٣﴾

34. Kuwa Toobad keena qabasho ka hor mooyee Ogaadana in Eebe Dambi Dhaafo oo Naxariisto.

اِلَّا الَّذِيْنَ تَابُوْا مِنْ قَبْلِ اَنْ تَقْدُرُوْا عَلَيْهِمْ
فَاعْلَمُوْا اَنَّ اِلٰهَ عَفُوْرٌ رَّحِيْمٌ ﴿٢٤﴾

35. Kuwa (Xaqa) rumeeyow ka dhawrsada Eebe una Doona Xaggiisa Dha-

يٰۤاَيُّهَا الَّذِيْنَ اٰمَنُوْا اتَّقُوا اِلٰهَ وَابْتَغُوْا اِلَيْهِ

waansho kuna Jahaada Jidkiisa waxaad u dhawdihiin inaad Liibaantaane.

الْوَسِيلَةَ وَجَهْدُوا فِي سَبِيلِهِ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٢٥﴾

Eebe ma Jecla Xumaanta iyo Fasaadka ee wuxuu Jecelyahay Wanaagga iyo Khayrka, saasuuna u Dhawray Nafta Dadka oo Ciddii u Disha Naf xaq Darro waxay la Midtahay mid Dadkoo Dhan Dishay, tii Noolaysa oo korisana waxay la mid tahay mid Dadkoo Dhan Noolaysay, Saasaana loo Ciqaabi Ciddii Diinta Eebe iyo Nabiga la Dagaalanta, oo Dhulka Fasaadisa, waana in la Laayo ama Gacnaha iyo Lugaha is Dhaaf loo gooyo, ama la Wadho, ama Dhulka laga Eryo Iyagoo Dulloobay Aakhiro iyo Adduunba, Ciddiise intaan la Qabanin Toobadkeenta Eebe wuu u Dhaafi. Tan kale waa in Ilaahay loogu Dhawaado Camal Fiican iyo Wanaag. Sida Salaadda, Zakada, Soonka, Xajka, Jahaadka, Sadaqada, Wax barashada iyo Baridda.

Ibnu Cabbas wuxuu Yidhi: Wasiladu Waa Dhawaansho, Qataadana wuxuu Yidhi: Ugu Dhawaada Eebe Daacadiisa iyo Wuxuu Jecelyahay.

Waxaana Xadiith ku Sugnaaday inay tahay Darajo Jannada Dhexdeeda ah oo ka Siiyo Cid eebe Jecelyahay Sida Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Al-Maa'idah (32-35).

36. Kuwa Gaaloobay hadduu u ahaado waxa Dhulka ku Sugaan oo Dhan iyo wax la mid ah inay iskaga Furtaan Cadaabka Maalinta Qiyaame lagama Aqbaleen waxayna Mudan Cadaab Daran.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا لَأُولَئِكَ لَهُمْ مَأْوِي الْأَرْضِ جَمِيعًا وَمِثْلَهُ مَعَهُ لِيَفْتَدُوا بِهِ مِنْ عَذَابِ يَوْمِ الْقِيَامَةِ مَا تُقْبَلُ مِنْهُمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٢٦﴾

37. Waxay Dooni inay ka soo Baxaan Naarta kamana Baxaan Xaggeeda waxayna mudan Cadaab Joogta ah.

يُرِيدُونَ أَنْ يُخْرِجُوا مِنَ النَّارِ وَمَا هُمْ بِخَارِجِينَ مِنْهَا وَلَهُمْ عَذَابٌ مُّهِمٌ ﴿٢٧﴾

38. Tuugga iyo Tuugadda Gooya Gacmahood Abaalmarin waxay kasbadeen Darteed waana Xanuujin Eebe Ilaahayna waa adkaade Falsan.

وَالسَّارِقُ وَالسَّارِقَةُ فَاقْطَعُوا أَيْدِيَهُمَا جَزَاءً بِمَا كَسَبَا نَكَالًا مِنَ اللَّهِ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٨﴾

39. Ciddiise Toobad keenta Dulmigiisa ka Dib oo Fiicnaada Ilaahay wuu ka Toobad Aqbali, Eebana waa Dambi Dhaafe naxariista.

فَمَنْ تَابَ مِنْ بَعْدِ ظُلْمِهِ وَأَصْلَحَ فَإِنَّ اللَّهَ يَتُوبُ عَلَيْهِ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٢٩﴾

40. Miyaadan Ogayn in Eebe u sugnaaday Xukunka Samooyinka iyo Dhulka uuna Cadaabi Cidduu Doono, waana u dambi dhaafi Ciduu la doono Ilaahayna wax kasta wuu karaa.

أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ اللَّهَ لَهُ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ يُعَذِّبُ مَنْ يَشَاءُ وَيَغْفِرُ لِمَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٣٠﴾

Cadaabka Aakharo iyo Ciqaabteeda wax kasta oo Adduunka Jooga iyo wax la mid ahba waa layskaga Furanlahaa, lamase aqballo, Gaalana lagama Bixiyo Naarta, waxayna Mudan Cadaab Joogta ah. Aayadaha kale waxay ka warrami farina in Tuugga la Gooyo Gacanta Rag iyo Haweenba, maxaayeeelay waa Arrin Xun oo Diinta, Caqliga, iyo Abuuridda Fiicanba Diidi, sideo Ruux Caqli leh u Gali Guryo Dad ama u Jabsan, ama Xoolahooda u Kaxaysan si qarsoodi ah Isagoon ka Yaabayn Eebe, Dhawrayna Akhlaaqda, Ilaalidayna Xaqa Walaalkiisa ku Dhibtamay xasilinta Xoolahaa, Kaas Abaalkiisu wa in laga Fogeeyo Gacanta Xun oo Bukta, kuwase Doqomada ah een wax kasayn ee wax ka sheegi Ciqaabta Tuugga, may u Naxariistaan Miskiinka la Xaday Dhididkiisii intay u Naxariisan Tuug, Mise Iyagaa Tuuga ah, Maxaase laga Faa'iiday Markii laga Tagay Arrintaas sow cid Walba kuma Seexato Cabsi kumana soo Toosto Cabsi, Imisaase Tuugo dhacda Habeen iyo Dharaar, dadna lagu Dilaa, ood maqashaa Dhibaato aan laga Sheekaysan karin, Ma saasaa Roon mise in la qabto Tuugga Gacantiisa oo la Eedbiyo, oo Dadka iyo Xooloheesu Nabadgalyo ku Noolaadaan, Gaaladuse ma Eebay uga Naxariis badan yihiin Khalqigiisa, ha Abuurteen Iyagu Tuugo ayna gooynayn, oo haw Sameeyen Cir iyo dhul iyo Wadan ay Dagaan, hana ka Bexeen Wadanka iyo Dhulka Eebe, Illeen Tuugo iyo Tuug ma Rabee.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeele) Wuxuu yidhi: Eebe ha Lacnado Tuug wuxuu Xadaa Ukun oo la Goyn Gacantiisa oos Xadi Xadhig oo la Goyn, Taasina waxay ku Tusin Naf Xumida Tuuga iyo kan Daba Joogaba, Naxariisina ma aha in Ruux Buka lagu sii Daayo Dadka ee waxaa Naxariis ah in la Daweeyo Khayrkana la Tusiyo Wanaagana lagu Hanuuniyo Shaqana loo yeelo Hadday Baahi Jirto, waxaannu Rumaysanahay Eebaha Falka San iyo Xukunka Caadilka ah, ee ha u soo Noqdeen kuwaas Qalbiga ka Buka ee Tuugada Ayidi. Al-Maa'idah (36-40).

41. Rasuulow Yeyna ku Walbahaarin kuwa ku Dag dagi Gaalnimada oo ah kuwa ku Yidhi Afkooda waan Rumaynay ooyna Rumayn Quluubtoodu, iyo kuwa Yuhuudoobay waxay maqli ogyihiin Beenta waxayna maqli Ogyihiin qoom kale oon kuu Imaanin waxayna ka leexiyaan Kalimooyinka Meelaheeda (Dhabta) waxayna Odhan haddii laydinsiiyo kan (Leexsan) qaata haddaanse laydin siin ka Digtoonaa, Ruxuu Doono Eebe Ibtalayntiisa waxba ugama hanatid Eebe, kuwaasina waa kuwaan Eebe la Doonin inuu Daahiriyo quluubtooda, waxayna Mudan adduunka Dulli Aakharana waxay mudan Cadaab wayn.

42. Waxay Maqli Ogyihiin Beenta waxayna Cunid Badanyihiin Xaaraanta, hadday kuu Yimaaddaana kala Xukun Dhexdooda ama ka Jeedso haddaad kajeedsatana Wax kaama dhibaantaa haddaad kala xukuntana Caddaalad kukala xukun Eebe wuxuu jecelyahay caadiliintee.

* يَا أَيُّهَا الرَّسُولُ لَا يَحْزُنكَ الَّذِينَ يُسْرِعُونَ
 فِي الْكُفْرِ مِنَ الَّذِينَ قَالُوا آمَنَّا بِأَقْوَامِهِمْ
 وَلَمْ تُؤْمِنْ قُلُوبُهُمْ مِنَ الَّذِينَ هَادُوا
 سَمِعُوا لِلْكَذِبِ سَمْعًا وَلَمْ يَلْمِزُوا
 أَوْلِيَاءَهُمْ لِيُؤْتُوا مِنْ بَعْدِ
 مَا وَاعَدَهُمْ يَسْأَلُونَ إِنْ أُوتِيتُمْ هَذَا فَخُذُوهُ
 وَإِنْ لَمْ تَأْتَوْهُ فَاحْذَرُوا وَمَنْ يُرِدِ اللَّهُ
 فِتْنَتَهُ فَلَنْ تَمْلِكَ لَهُ مِنْ اللَّهِ شَيْئًا أُولَئِكَ الَّذِينَ
 لَمْ يُرِدِ اللَّهُ أَنْ يَهْتَدِ قُلُوبُهُمْ لَمْ يَلْفِظْ
 مَا كَفَرُوا وَلَمْ يَكُن لَهُمْ مِنَ اللَّهِ حَافِظٌ ٤١

سَمِعُوا لِلْكَذِبِ أَكْثَرُونَ لِلسَّخِيَةِ فَإِنْ
 جَاءُوكَ فَاحْكُم بَيْنَهُمْ أَوْ أَعْرِضْ عَنْهُمْ وَإِنْ
 تُعْرِضْ عَنْهُمْ فَلَنْ يَضُرُّوكَ شَيْئًا وَإِنْ حَكَمْتَ
 فَاحْكُم بَيْنَهُمْ بِالْقِسْطِ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ
 الْمُقْسِطِينَ ٤٢

43. Siday Kuugu Xukuntami Iyadoo agtooda yahay Tawreed oo Xukunkii Eebe ku Yaal markaasna ay ka Jeedsan intaas ka Dib Kuwaasi ma aha Mu' - Muniin.

وَكَيْفَ يُحْكَمُونَكَ وَعِنْدَهُمُ التَّوْرَةُ فِيهَا
حُكْمُ اللَّهِ ثُمَّ تَقُولُونَ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَمَا أُولَئِكَ
بِالْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٣﴾

Ayadahanu waxay ku soo Degeen kuwa ku Dagdaga Gaalnimada oo ka Baxa Daacadda Eebe iyo Rasuulkiisa, oo ka Hormariya Hawadooda iyo Ra'yigooda Shareecadda Eebe, waana Munaafiqiinta Colka Eebe ah, waxaa kale oo Iyana Colka eebe ah, kuwa Yuhuudda ah ee Beenta maqla Dhexdoodana wax isu Sheega, Xaqana Leexiya, Siday u Leexiyeen, ee Qalloocana isfara inay Haystaan, wax kalana ayan maqlin, waana kuwa Eebe Ibtileyey, wax xagga Eebe wax uga Tarina ma Jiraan, Dulli iyo Cadaabayna Mudan Aakharo iyo Adduunba, Been maqalkana waxay ku Darsadeen Cunidda Xaaraanta iyo Boolida, wuxuuna u Khiyaar galiyey inuu iskaga Jeedsado hadday u Yimaadaan ama Caddaalad ku kala Xukumo, Xaqa oo la Qariyo, Beentoo la Faafiyo oo la maqlo iyo Xaaraanta oo la Cuno waa Caadada Yuhuudda iyo inta Raacda ama la Mid noqda Gaar ahaan waxay ku soo degeen Xaalka Zinada iyo Magdhawga Dilka, oy ka Been sheegeen, waxaase Waajibba in laga Leexdo Jidkooda. Al-Maa'idah (41-43).

44. Anagaa soo Dejinay Tawreed oo Dhexdeeda ku suganyahay Hanuun iyo Nuur, oyna ku xukumayeen Nabiyadii u Hogaansamay Eebe kuwii Yuhuu-doobay, waxaana Xukumi Jiray ma-daxdii iyo Culimadii wixii laga Doonay inay Ilaaliyaan oo Kitaabka Eebe ah, waxay ku ahaayeen Markhaati ee ha ka Cabsanina Dadka ee iga Cabsada ani, hana ku Gadanina Aayaadkayga Lacag (Qiimo) yar, Ciddaan Xukumin wuxu soo Dejiyey Eebe kuwaasi waa Gaalo uun.

إِنَّا أَنْزَلْنَا التَّوْرَةَ فِيهَا هُدًى وَنُورٌ يُحْكَمُ بِهَا
الْتِّيُوتِ الَّذِينَ اسْمَعُوا لِلَّذِينَ هَادُوا
وَالرَّسُولِ وَالْأَخْبَارِ بِمَا اسْتَحْفَظُوا مِنْ
كِتَابِ اللَّهِ وَكَانُوا عَلَيْهِ شُهَدَاءَ فَلَا تَحْشَوْا
النَّاسَ وَاحْشَوْا اللَّهَ وَلَا تَشْرُؤْا رِبَايَاتِي تَمَتَّ أَقْبِلًا
وَمَنْ لَمْ يَحْكَمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ
الْكُفْرُونَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaan ku Faralyeelay korkooda in Nafta (Loo qisaaso) Nafta, ishana Isha, Sankana Sanka, Dhagtana Dhagta, Iligana Iliga, nabaradana waa laysu Qisaasi, Ciddii iska Sadaqaysata (Saamaxda) waxay u Noqon Kafaaro (Dambi Dhaaf) Cidaanse Xukmin wuxu soo Dejiyey Eebe kuwaasi waa Daalimiin uun.

وَكَتَبْنَا عَلَيْهِمْ فِيهَا أَنْ النَّفْسِ بِالنَّفْسِ
وَالْعَيْنِ بِالْعَيْنِ وَالْأَنْفِ بِالْأَنْفِ وَالْأُذُنُ
بِالْأُذُنِ وَالسِّنُّ بِالسِّنِّ وَالْجُرُوحُ قِصَاصٌ
فَمَنْ تَصَدَّقَ بِهِ فَهُوَ كَفَّارَةٌ لَهُ وَمَنْ
لَمْ يَحْكَمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ
الظَّالِمُونَ ﴿٤٥﴾

Tawreed wuxuu ahaa Kitaab Eebe oo Xaq ah oos Nabi Muuse ku soo Dejiyey, ka Dibse Yuhuuddu Leexisay waxaana ku Yiil hanuun iyo Nuur, waxaana Xukumi Jiray Nabiyadii Eebe u Hogaansamay iyo Culimadii iyo Madaxdii wax kasaysay, waxaana la faray inay Dhawraan Maragna ka ahaadaan, oyna ku Gadanin Aayaadka Eebe wax Nacfi ah, Ciddaan Xukumin waxa Eebe soo Dejiyeyna waa mid Gaaloobay.

Ibnu Cabaas wuxuu Yidhi: Ciddii Diida waxa Eebe soo Dejiyey wuu Gaaloobay. Aayadda kalana waxay ka warrami Qisaasta iyo in Cid walba laga Gudam waxay gaysato, ama Naf ama xubin, Taasina waxay ku Tusin Caddaaladda Islaamka iyo in Sharciiga Eebe u Simanyahay Dadku, Ciddii iyadu iska Cafida Xaqbay u Leedahay Ajirna way ka Heli. Cidaan taas Xukuminna waa mid Daalimiin ah. Aayadduna waa arrin Guud oo Cid walba Ku Rumoobi, waxayna Caddayn in Dadka Rag iyo Haween lagu Qisaasi, waxaana Sugnaaday in Ragga Haweenka loo Qisaasi. Waana taa Caddaaladda Islaamka Ciddii ku Dhaqmi. Al-Maa'idah (44-45).

46. Waxaana Raacsiinay Raadkoodii ciise Ibnu Maryama isagoo Rumayn, wixii Hortiisa ahaa oo Tawreeda, waxaana Siinay Injiil oo Hanuun iyo Nuur ku Suganyahay, una Rumayn wixii ka Horeeyey oo Tawreeda Hanuun iyo Waanana u ah kuwa Dhawrsada.

وَقَفَّيْنَا عَلَىٰ آثَرِهِم بِعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ التَّوْرَةِ ۗ وَآتَيْنَاهُ الْإِنجِيلَ فِيهِ هُدًى وَنُورٌ وَمُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ التَّوْرَةِ ۗ وَهُدًى وَرَحْمَةً لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٦﴾

47. Ha Xukumeen Ehelka Injiil wuxuu ku soo Dejiyey Eebe Dhexdiisa, Cidaan Xukumin wuxuu Soo Dejiyey Eebe waa Mid Faasiq ah uun.

وَلِيُخَذِّكُمْ أَهْلَ الْإِنجِيلِ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فِيهِ ۖ وَمَنْ لَّا يُحِبَّكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴿٤٧﴾

48. Waxaana kugu Soo Dejiyey Kitaabka Xaqa Isagoo Rumayn wixii ka Horeeyey oo Kitaab ah, Isagoo Marag iyo Ilaaliye u ah, ee Ku kala Xukun Dhexdooda wuxuu Soo Dejiyey Eebe hana ka Raacin Hawadooda waxa kuu Yimid oo Xaq ah, Dhammaan waxaan u Yeellay Shareeco iyo Waddo, hadduu Doono Eebana wuxuu idinka Yeeli Umad kaliya, Laakiin wuu idinku Imtixaami wuxuu idin Siyey ee u Tartama Khayrka, Xagga Eebe yey Noqoshadiinu tahay Dhammaan wuxuuna idiinka Warrami waxaad isku Diidanaydeen.

وَأَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ الْكِتَابِ وَمُهَيِّمًا عَلَيْهِ ۖ فَآخِذْ بِهِنَّهْم بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ ۗ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ عَمَّا جَاءَكَ مِنَ الْحَقِّ ۚ لِكُلِّ جَعَلْنَا لَكُمْ شِرْعَةً وَمِنْهَا جَا ۗ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً ۗ وَلَٰكِن لِّيُتْلَوْكُمْ فِي مَاءِ آثَانِكُمْ فَانْتَبِهُوا ۚ الْخَيْرَاتُ إِلَى اللَّهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا ۖ فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنتُمْ فِيهَا تَحْتَلِفُونَ ﴿٤٨﴾

Waxaa ka Dambeeyey Tawreed Nabi Ciise oo Injiil lagu soo Dejiyey isagoo Hanuun ah u Rumaynna Tawreed, waxaana la faray Injiil Ehelkeedii inay Xukumaan waxa Eebe soo Dejiyey Illeen Cidaan Xukumin waxa Eebe soo Dejiyey waa uun Faasiq.

Markaasaa Quraanka Sharafta leh Eebe ku soo Dejiyey Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeele) Isagoo Marag iyo Ilaaliye u ah Kutubtii hore, waana in lagu Dhaqmo, oon hawada laga Dooranin, Umad Kasta wuxuu Eebe u Yeelay Sharci iyo Waddo, hadduu Doonana wuxuu ka Yeeli lahaa umad Qudha, Laakiin inuu ku Imtixaamo wuxuu Siyey, waana in Wanaagga loo Tartamo Illeen Eebaa lo Noqone.

Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Annagu haddaan nahay Nabiyada waxaan nahay Walaalo kala hooya ah (sharciga lagu dhaqmi waa kala duwan yahay) Diintanaduna waa Mid. Al-Maa'idah (46-48).

49. Ku kala Xukun Dhexdooda wuxuu soo Dejiyey Eebe, hana Raacin Hawadooda, kana Digtoonow inay kaa Fidmeeyaan waxa Eebe kugu soo Dejiyey qaarkiis, hadday Jeedsadaanna Ogow in Eebe la Doonayo inuu ku Assiibo (Ciqaabo) Dambigooda Qaarkiis, wax badan oo Dadka ka mid ahna waa Faasiqiin.

وَأِنْ أَحْكَمَ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ وَأَحْذَرُوهُمْ أَنْ يَفْتَنُوكَ عَنْ بَعْضِ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ عَلَيْكَ فَإِنْ تَوَلَّوْا فَاعْلَمُوا أَنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ أَنْ يُصِيبَهُمْ بِبَعْضِ ذُنُوبِهِمْ وَإِنَّ كَثِيرًا مِّنَ النَّاسِ لَفَاسِقُونَ ﴿٤٩﴾

50. Ma Xukunka Jaahilayad yey doonayaan, yaa uga Fiican Eebe Xukunkii-sa qoomka wax Yaqiinsan (Rumaysan).

أَعْيَنَّاكُمْ لِالْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمِنْ أَحْسَنٍ مِّنَ اللَّهِ حُكْمًا الْقَوْمِ الْفَاسِقُونَ ﴿٥٠﴾

wuxuu Eebe Faray Nabiga Umaddiisuna waa la mide inuu ku kala Xukumo Dadka Quraanka Eebe soo Dejiyey, uusanna Raacin waxay Gaaladu Jeceshahay, kana Digtoonaa inay ka Leexiyaan Xaqa, hadday Xaqa ka Jeedsanna waxaa u Sabab ah Dambigooda oo Eebe u qabtay Dadka wax badan oo ka mid ahna waa Faasiqiin, mana haboona in Xukun Jaahili ah laga Doorto Xukunka iyo Sharciga Eebe ee Wanaagsan.

Ibnu Kathiir wuxuu Yidhi: Eebe wuxuu ku diidi oo Canaan kuwa ka Leexda Xukunka Eebe ee Kulmiyey khayr oo Dhan, kana Reeba Xumaan oo Dhan, oo uga leexday wax ka soo Hadhay oo ra'yi iyo Hawo iyo Nadaamyo ay Sameeyeen Dad iyagoon Dalil Shareecada Eebe ka haysan, Ciddii saas fasha waa in lala Dagaallamo intuu uga noqda Xukunka Eebe iyo Rassuulkiisa, uusanna Xukumin wax ka soo Hadhay wax yar iyo wax wayn midna.

Xasan Basrina wuxuu Yidhi: Ciddii Xukunta Xukunka Eebe waxaan ahayn, waa Xukun Jaahili ah. Waa na kaas Sharciga Eebe iyo Diintiisii waxaana Dhab ah Ciddii ku Dhaqantana inay Heli Nabadgalyo, Caddaalad, Barwaaqo iyo Wanaag, Tii ka leexatana ay la Kulmi Halaag, qas, caddaalad darro, Khilaaf, Nabadgalyo La'aan iyo Dhib oo Dhan, Sida Muuqata, waxaase lala Hadli Ciddi Caqli leh. Al-Maa'idah (49-50).

51. Kuwa Xaqa Rumeeyow ha ka yeelanina Yuhuud iyo Nasaara Sokeeye, Qaarkood waa Sokeeyaha Qaarka (Kale) Ciddii ka Sokeeya Yeelata oo idinka Mid ah wuxuu ka midyahay Iyaga, Eebe ma Hanuuniyo Qoomka Daalimiinta ah.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا الْيَهُودَ وَالنَّصَارَىٰ أَوْلِيَاءَ ۚ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ وَمَنْ يَتَوَلَّهُمْ يَتَوَلَّاهُمْ وَلَهُمْ فِي اللَّهِ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٥١﴾

52. Waxaad Arkaysaan kuwa Qalbiga ka Buka (Munaafiqiinta) oo u Degdagi Dhexdooda, iyagoo Dhihi waxaannu ka Cabsan inay nagu dhacdo Dhibaato (Socota) waxay u Dhawdahay in Eebe

فَتَرَى الَّذِينَ فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ يُسْرِعُونَ فِيهِمْ يَقُولُونَ خَشْيٌ أَنْ تُصِيبَنَا آيَةٌ فَعَسَىٰ اللَّهُ أَنْ يَأْتِيَ بِالْفَتْحِ وَأَنْزِلَ مِنَ عِنْدِهِ فَيُصِيبُوا أَعْلَىٰ مَا أَسْرَوْنَ فَا فِي أَنفُسِهِمْ تَلْمِيزٌ ﴿٥٢﴾

keeno Fatxi (Gargaar) Xagiisa ah oo Markaas ay ahaadaan kuwo waxay u Qarsanayeen Naftooda (oo Gaal jacayl ah) Qoomameeya.

53. Waxay Odhan kuwii Rumeeyey (Xaqa) ma kuwaasaa Kuwii ku Dhaartay Eebe Dhaar Adag inay idinla Jiraan, waxaa Hoobtay Camalkoodii waxayna ahaadeen kuwo Khasaaray.

وَيَقُولُ الَّذِينَ آمَنُوا أَهَؤُلَاءِ الَّذِينَ أَقْسَمُوا بِاللَّهِ جَهْدَ أَمْسِهِمْ أَنَّهُمْ لَمَعَكُمْ حَيَّطْتُمْ أَعْمَالَهُمْ فَأَصْبَحُوا
حَسِيرِينَ ﴿٥٣﴾

Wuxuu Eebe Sarreeye ka Reebayaa kuwa xaqa Rumeeyey inay Sokeeye ka Yeeshaan Yuhuud iyo Nasaara ee ah Col Islaamka iyo Dadkiisa, Illeen qaarkood qaarka kale Sokeeyuu u Yahaye, Ciddii Xadhiidh Sokeeye la Yeelataana Iyaguu ka mid yahay, Eebana ma Hanuuniyo qoom daalimiina, waxaana jira in kuwa Munaafiqiinta ah ee qalbiga ka Buka u Degdagaan Xidhiidhintooda iyagoo Shegi inay ka Cabsan in dhib ku Dhaco, waxayse u Dhawdahay in Gargaarka Eebe Yimaado oo Markaas qoomameeyaan Xumaantay Qarsanayeen, waxayna odhan kuwa Xaqa Rumeeyey ma Kuwaasaa kuwii Dhaarta Adag Eebe ku Dhaartay inay idinla Jiraan, Camalkoodu wuu buray wayna Khasaareen. Aayaduhuna waxay Wareemi kuwaan Noolaan Karin Xidhiidh Gaalo La'aanteed, waana Doqonimo inaad Colkaa Saaxiib ka Dhigato, Yaase wax Maqashiin Dadka dhumay. Al-Maa'idah (51-53).

54. Kuwa Xaqa Rumeeyow Ruuxii ka Ridooba Diintiisa oo idinka mid ah, wuxuu Eebe keeni qoom uu Jecelyahay iyana Jecel una naxariista Mu'miniinta kuna Daran Gaalada, kuna Jahaadi Jidka Eebe oon ka Cabsanayn Canaanta Canaante, Taasina waa Fadliga Eebe wuxuuna Siiyaa Cidduu Doono, Eebana waa Deeq Badane Og.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا مِّنْ رَّبِّكَ مِنكَرًا مِّنْ دِينِهِ وَسَوْفَ
يَأْتِي اللَّهُ بِقَوْمٍ يُحِبُّهُمْ وَيُحِبُّونَهُ أَذِلَّةٌ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ
أَعْدَاءُ عَلَى الْكَافِرِينَ يُجَاهِدُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلَا يَخَافُونَ
لَوْمَةً لَّا يُمْرِكُ ذَلِكَ فَضَّلَ اللَّهُ بِنُورِهِ مَن يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ
عَلِيمٌ ﴿٥٤﴾

55. Waligiinnu waa uun Eebe iyo Rasuulkiisa iyo kuwa Rumeeyey (Xaqa) ee Ooga Salaadda oo Bixiya Zakada oo Rukuuca.

إِنَّمَا أَوْلِيَاكُمْ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَالَّذِينَ آمَنُوا الَّذِينَ يُقِيمُونَ
الصَّلَاةَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَهُمْ لَكَوْنٌ ﴿٥٥﴾

56. Ciddii ka Waliyeelata Eebe iyo Rasuulkiisa iyo Kuwa Rumeeyey Xaqa Xisbiga Ilaahay Umbaa Adkaan.

وَمَنْ يَتَوَلَّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَالَّذِينَ آمَنُوا فَإِنَّ حِزْبَ اللَّهِ
هُمُ الْقَائِمُونَ ﴿٥٦﴾

Ilaahay wuxuu Inoo Sheegi Ciddii ka Jeedsata Gargaarka Diintiisa iyo Fulinta Sharcigiisa inuu Eebe ku Badali mid ka Khayr roon, kana Xoog Badan kana Toosan, oo ku Jahaadi Jidka Eebe, kana Cabsanayn Dagaalid, Illeen Eebaa Fadligiisu waasac yahay, Mu'miniintana Eebaa u Wali ah, iyo Rasuulkiisa iyo Kuwa Xaqa Rumeeyey, ee Tukada, Zakadana Bixiya, Ciddii ka Wali Yeelata Ilaahay Rasuulkiisa iyo Kuwa Xaqa Rumeeyeyna wuu Guulaysan, Ileen Xisbiga Eebe Umbaa adkaadee, Aayaduhuna waxay Ishaari in Ciddii Gaalawda Eebe ka Kaaftoomi, kuna Badali mid ka Fiican, Tan kale waa inaan Xaqa looga leexan loogana Aamusin Dagaalidda.

Imaam Axmed wuxuu Wariyey: in Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Yidhi: Yuuna ka Reebin Midkiin Cabsida Dadka Inuu Xaqa Sheego, Illeen ma soo Dhaweeyo Ajal, Mana Fogeeyo Risqi in Xaqa la sheego, ama loo Sheegi mid Wayn. Al-Maa'idah (54-56).

57. Kuwa xaqa Reemeyow ha ka Yeelanina kuwa ka Yeeshay Diinta Jees Jees iyo Ciyaar oo ah kuwa Ehelu Kitaabka ah Idinkana Horeeyey iyo Gaalada sokeeye, kana Dhawrasada Eebe haddaad Tihiiin Mu'miniin.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا الَّذِينَ اتَّخَذُوا دِينَكُمْ
هُزُؤًا وَعِبَاءً مِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِكُمْ وَالْكَافِرَ
أُولِيَاءَ ۚ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ كُفْرَكُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿٥٧﴾

58. Markaad ugu Dhawaaqdaan Salaaddana waxay ka Yeeshaan Jees Jees iyo Ciyaar, waxaana Arrintaas ugu Wacan inay Yihiin Qoomaan waxka-sayn.

وَإِذَا نَادَيْتُمْ إِلَى الصَّلَاةِ اتَّخَذُوا هَاهُهَا هُورًا وَعِبَاءً ذَلِكَ
بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٥٨﴾

59. Waxaad Dhahdaa Ehelu Kitaabow Miyaad Noogu Cadhoonaysaan inaan Rumaynay Eebe iyo waxa naloo soo Dejiyey iyo wixii la Dajiyey horay Mooyee, Badankiinnu waa Faasiqiin.

قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ هَلْ تَتَّقُونَ وَمَا آتَاكُمْ بِاللَّهِ
وَمَا أَنْزَلَ إِلَيْنَا وَمَا أَنْزَلَ مِنْ قَبْلُ وَأَنْ كُنْتُمْ
فَتَّيْسُوفُونَ ﴿٥٩﴾

60. Waxaad Dhahdaa maydinka warra-maa waxa ka Sharbadan Arrintaas abaal Marinta Eebe Agtiisa waa mid Eebe Nacladay una Cadhooday kana Yeelay Daanyeerro, Doofaarro iyo Shaydaan Caabude, Kuwaasay Sharba-dantahay Meeshoodu kana Dhumid Badan Jidka Toosan.

قُلْ هَلْ أَنْتُمْ بِشِرِّينَ ذَلِكَ مَثُوبَةٌ عِنْدَ اللَّهِ مِنْ لَعْنَةِ اللَّهِ
وَعُذُوبٍ عَلَيْهِ وَجَعَلَ مِنْهُمْ الْفِرْدَةَ وَالْحُنَّازِيرَ وَعَبَدَ
الطَّاغُوتِ أُولِيَاءَ شَرِّ مَكَانًا وَأَصْلَ عَنْ سَوَاءِ
السَّبِيلِ ﴿٦٠﴾

Wax badan Yuu Quraanku ka Digay Sokeeye ka Yeelashada Gaalada ka Yeelan Diinta Eebe Jees Jees iyo Ciyaar, ama ha ahaado Ehelu Kitaab ama Gaala Kalee, Sidoo kale waxay ku Jees Jeesaan Aadaanka Salaadda Ileen waa kuwo aan wax kasayne, waxay Muslimiinta ku Nici oo xaqay Rumeeyeen ahaynna ma jiro, waxaana U Xun wax la arko Cid Eebe Lacnaday, oo u Cadhooday, oo ka Yeelay Daanyeer, Doofaar iyo Sheydaan Caabud, waxaana jirta arrin Dhab ah oo quraanka ku Celceliyo oo ah in Gaalo tahay Colka Eebe, Nabiga, Diinta Islaamka ah, Muslimiinta iyo Xaqa Toosanba, waana in laga Digtoonaado lagana Feejignaado. Al-Maa'idah (57-60).

61. Hadday idiin Yimaaddaan waxay Dhahaan waan Rumaynay (Xaqa) iya-goo la soo Galay Gaalnimu, Iana Baxay, Eebana waa Ogyahay waxay Qarin.

وَإِذَا جَاءَهُمْ قَوْلًا مِّنْ أَمْنًا وَقَدْ ذَلَعُوا بِالْكَفْرِ وَهَمَّ قَدْ
خَرَجُوا بِهِ ۗ وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا كَانُوا يَكْتُمُونَ ﴿٦١﴾

62. Waxaad Arkaysaa wax Badan oo ka mid ah oo u degdegi dambiga iyo Colnimada iyo cunidda Xaaraanta, waxaa Xumaan badan waxay Fali.

وَرَبَّيْ كَبِيرًا مِّنْهُمْ يُسْئِرُونَ فِي الْأَثَرِ وَالْعُدُونِ
وَأَكْلِهِمُ السُّحْتِ لَيْسَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٢﴾

63. May ka Reebaan Ikhyaartu iyo culimadu hadalkooda dambiga ah iyo Cunidda Xaaraanta, waxaa Xumaan badan waxay Samayn.

لَوْلَا يَنْهَاهُمُ الرَّبَّيُّونَ وَالْأَخْبَارُ عَنْ قَوْلِهِمُ الْإِثْمَ
وَأَكْلِهِمُ السُّحْتِ لَيْسَ مَا كَانُوا يَصْنَعُونَ ﴿١٣﴾

64. Waxay Tidhi Yuhuuddu Gacanta Eebe waa Laabantahay, ha lallaabo Gacmahoodu hana La naclado hadalkay Dheheen Dartiis, saas ma aha ee waxay ku Fidsanyihiin Khayrka (Decq badane) wuxuuna u Nafaqeyaa Siduu Doono, wuxuuna u Kordhin wax badan oo iyaga ka mid ah waxa lagaaga soo Dejiyey Eebahaa Xad Gudub iyo Gaalnimo, waxaana ku Dhex tuuray Col iyo Cadho tan iyo Qiyaame, mar kastooy huriyaan dab Dagaalna waxaa bakh-tiyya Eebe, waxayna la Socdaan Dhulka Fasaad, Ilaahayna ma Jecla kuwa wax Fasaadiya.

وَقَالَتِ الْيَهُودُ يُدْعَى اللَّهُ مَعْلُومَةً عَلَّتْ أَيْدِيهِمْ وَأَلْعَوْا بِمَا
قَالُوا بَلْ يَدَاهُ مَبْسُوطَتَانِ يُنفِقُ كَيْفَ يَشَاءُ وَلَيَزِيدَنَّ
كَبِيرًا مِنْهُمْ مَا أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ مِنَ رَّبِّكَ ظُلْمًا وَكَفْرًا وَالْقَيْنَا
بَيْنَهُمُ الْعِدَّةَ وَالْبَعْضَةَ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ كَمَا
أَوْفَدُوا نَارًا لِلْحَرْبِ أَطْفَأَهَا اللَّهُ وَيَسْعَوْنَ فِي
الْأَرْضِ فَسَادًا وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ الْمُفْسِدِينَ ﴿١٤﴾

Munaafiqiintu meelay Joogaanba kama tagaan Gaalnimo iyo Xumaan, Eebana waa Ogyahay waxay qarir, waxaadna ku aragtaa inay u deg degi dambiga, Colnimada iyo Xaaraan Cunka, wax Xunbayna Falaan, Culimadaan ka reebin waxaasna waxay Sameeyeen wax Xumaan badan. Yuhuudna Lacnadi ha ku Dhacdee waxay Af-Xumeeyeen Ilaaheen Sarreeye, kuna Sheegeen Bakhaylnimo, Iyagaase Bakhayllo ah lana Lacnaday ee Eebe waa Decqsi Siduu Rabo wax u Bixiya, waxayna ka qaadi Xaqa Xad Gudub, Gaalnimo, Col Dhexdooda ah, Cadho Tan iyo Qiyaamada, Dabkay Huriyaanna Eebaa Bakhtiin, Dhulkana way Fasaadiyaan Eebana ma jecla kuwa wax Fasaadiya. Al-Maa'idah (61-64).

65. Hadday Ehelu Kitaabku Ru-meeyaan xaqa oy Dhawrsadaan waxaan ka Asturi lahayn Xagooda Xumaantooda waxaana Galinlahayn Jannada Na-ciimo.

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ الْكِتَابِ آمَنُوا وَأَتَقُوا لَكَفَرْنَا
عَنْهُمْ سِيَئَاتِهِمْ وَلَا دَخَلَتْهُمْ جَنَّتِ
النَّعِيمِ ﴿١٥﴾

66. Hadday ku Camal falaan Tawreed, Injiil, iyo waxa looga soo Dejiyey Xagga Eebahoodna waxay ka Cuni lahaayeen Korkooda iyo Hoostooda,

وَلَوْ أَنَّهُمْ آتَمُوا التَّوْرَةَ وَالْإِنْجِيلَ وَمَا أَنْزَلْنَا إِلَيْهِمْ
مِّنْ رَّبِّهِمْ لَأَكَلُوا مِن قَوْعِهِمْ وَمِن تَحْتِ

«barwaaqo» waxaa ka mid ah Umad Dhex dhexaysa wax badan oo ka mid ahna waxaa Xun Waxay Fali.

67. Rasuulow Gaadhsii waxa lagaaga soo Dejiyey Eebahaa (Dadka) Haddaadan Falin Maadan Gaadhsiin Risaaladiiisa "Fariintiisa", Eebaana kaa Ilaalin Dadka, Eebana ma hanuuniyo qoom Gaala ah.

أَرْجُلِهِمْ فَتَنْهَرُ أُمَّةٌ مُّقْتَصِدَةً وَكَثِيرًا
مِنْهُمْ سَاءَ مَا يَحْمِلُونَ ﴿٦٦﴾

﴿يَأْتِيهَا الرُّسُولُ يَلْعَلُ مَا نُزِّلَ إِلَيْكَ مِنْ رَبِّكَ
وَإِنْ لَمْ تَفْعَلْ فَمَا بَلَغْتَ رِسَالَتَهُ وَاللَّهُ
يَعْصِمُكَ مِنَ النَّاسِ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ
الْكَافِرِينَ ﴿٦٧﴾

Kutubta Eebe soo Dejiyey waa Xaq Haddaan la Leexin, saas Darteed hadday ku Camal Fali Lahaayeen Ehelu Kitaabku waxaa la Dhaafi lahaa Dambigooda, waana la Jannanyi lahaa, waxayna Heli Lahaayeen Barwaaqo, waxaase laga helaa Cid Dhex dhexaysa, wax badan baase Xumaan Fala, Eebana wuxuu Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Gaadhsiiyo dadka waxa Eebe ku soo Dejiyey, Hadduusan Saas falinna wax Ma Gaadhsiin, Dadkana Eebaa Ka Dhawri mana Hanuuniyo Gaalada.

Caa'isha waxay Tidhi: Hadduu Nabigu Qarin waxa loo wax-yooday wuxuu qarin lahaa Aayaddan. Nabiguna Maalinta Xajkii waynaa wuxuu Warsaday Asaxaabta inuu Gaadhsiiyey Xaqa iyo in Kale waxayna sheegeen inuu Gaadhsiiyey, Markaasuu Farta Cirka u Taagay oo Yidhi oo ku Soo Cel Celiyey oo Yidhi Eebow sow ma Gaadhsiin. Al-Maa'idah (65-67).

68. Waxaad Dhahdaa Ehelu Kitaabow waxba ma Tihidiin intaad ka Oogtaan Tawreed, Injiil iyo waxa Laydiinka soo Dejiyey Xagga Eebihiiin (Quraanka) wuxuuna u Kordhin wax badan oo ka mid ah waxa Xagga Eebahaa lagaaga soo Dejiyey Xad Gudub iyo Gaalnimo ee haw murugoon qoomka gaalada ah.

قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لَسْتُمْ عَلَى شَيْءٍ حَتَّى تُقِيمُوا
التَّوْرَةَ وَالْإِنْجِيلَ وَمَا نُزِّلَ إِلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ
وَلَسْتُمْ بَعْدَ ذَلِكَ مِنْ رَبِّكُمْ
طُغْيَانًا وَكُفْرًا فَلَا تَأْسَ عَلَى الْقَوْمِ الْكَافِرِينَ ﴿٦٨﴾

69. Kuwa Xaqa Rumeeyey iyo kuwa Yuhuudoobay iyo Saabi'iinta iyo Nasaara Ciddii Rumeysa Eebe, Maalinta Dambe (Qiyaamada) oo fala camal fiican cabsi korkooda ma ahaato iyo Walbahaar (Midna).

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَالَّذِينَ هَادُوا وَالصَّالِحِينَ
وَالصَّبْرَى مَنْ ءَامَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَعَمِلَ
صَالِحًا فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦٩﴾

70. Waxaan Qaadnay Ballanka Bani'iis-raa'iil waxaana u Diray Xaggooda Rasuullo, Markastoo uu ula Yimaaddo Rasuul waxaan Naftoodu Jeclayn Koox way Beeniyaan Kooxna way Dilaan.

لَقَدْ أَخَذْنَا مِيثَاقَ بَنِي إِسْرَائِيلَ وَرَأْسَنَّا الْيَهُودَ رُسُلًا
كُلَّمَا جَاءَهُمْ رَسُولٌ بِمَا لَا تَهْوَى أَنْفُسُهُمْ فَرِيقًا
كَذَّبُوا وَفِرًّا يُفْتَلُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxayna u Maleeyeen inaan Fidmo Jirin, wayna Indho Beeleen oo Dhago Beeleen, Markaasuu Eebe ka Toobad Aqbalay, markaasay Indho Beeleen oo

وَحَسِبُوا الْأَلْتُونَ فِتْنَةً فَعَمُوا وَصَمُوا ثُمَّ تَابَ اللَّهُ
عَلَيْهِمْ فَأَعَمُوا وَصَمُوا كَثِيرًا مِنْهُمْ وَاللَّهُ بَصِيرٌ

Dhago Beeleen wax badan oo ka mid ah
Eebana waa Arkaa waxay Fali.

يَمَّا يَعْْمَلُونَ ﴿٧١﴾

Ehelu Kitaab waxba ma aha intay kaga Soocdaan waxay Tawreed, Injiil iyo Quraanka fari, wax badan oo ka mid ahna way Xad-gudbaan oo Gaaloobaan markay quraanka Maqlaan, Ciddii Eebe Rumeysa iyo Qiyaame oo Camal Fiican fasha oo Waafaqsan Shareecada Islaamka Cabsi iyo Murug midna ma Hayso, reer Baniis Israa'iil wuxuu Eebe Ballan kaga qaaday inay xaqa Rumeeyaan, wayse Buriyeen oo ay Rasuullada qaar Beeniyaan qaarna Dilaan, iyagoon Dhib u Arkayn, Waase kuwo Indho iyo Dhaga la', waana arkaa Eebe waxay fali, Aayaduhuna waxay Caddayn in Dadku Qiimo ku leeyahay Raacidda iyo Ku Dhaqanka xaqa, haddii kale waxba ma aha, wax qiima ahna ma laha. Al-Maa'idah (68-71).

72. Waxaa Gaaloobay kuwa Yidhi Eebe waa Masiixi Ibnu Maryama, Wuxuuna Yidhi Masiix (Ciise) Baniis Israa'iilow Caabuda Eebe ee ah Eebahay iyo Eebihii, Ruuxii u Shariig Yeela Eebe (La wadaajiyaa) wuxuu Eebe ka Xarri-may Jannada wuxuuna ku hoyan Naarta Daalimna ma helo Gargaare.

لَقَدْ كَفَرَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ هُوَ الْمَسِيحُ ابْنُ مَرْيَمَ وَقَالَ الْمَسِيحُ بَنِي إِسْرَائِيلَ اعْبُدُوا اللَّهَ رَبِّي وَرَبَّكُمْ إِنَّهُ مَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَقَدْ حَرَّمَ اللَّهُ عَلَيْهِ الْجَنَّةَ وَمَأْوَاهُ النَّارُ وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ أَنْصَارٍ ﴿٧٢﴾

73. Waxaa Gaaloobay kuwii Yidhi Ilaahay waa Saddex Midkood, macbuud xaq lugu caabudana ma lihidin oo aan macbuudka kaliga ah ahayn (waa-na midkaan waxna dhalin, lana dhalin), hadayna ka Joogin waxay Sheegina waxaa Taaban kuwa Gaaloobay oo ka mid ah Cadaab Daran.

لَقَدْ كَفَرَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ ثَلَاثٌ ثَلَاثَةٌ وَمَنْ إِلَهٌ إِلَّا إِلَهٌ وَاحِدٌ وَإِنْ لَمْ يَتَّخِذُوا عَمَّا يَقُولُونَ لِيَمْسَسَنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

74. Miyeyna u Toobad keenayn Eebe oyna Dambi Dhaaf warsanayn, Eebana Dambi Dhaafe Naxariista ah.

أَفَلَا يَتُوبُونَ إِلَى اللَّهِ وَيَسْتَغْفِرُونَ لَهُ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٧٤﴾

75. Masiix (Ciise) Ibnu maryama ma aha waxaan Rasuul ahayn, waxaana tagay hortii rasuuladii. hooyadiisna waxay ahayd rumayso, waxayna cuni jireen Cunnada, day Saannu ugu Caddayn Aayaadka Markaas day Sida loo iilo.

مَا الْمَسِيحُ ابْنُ مَرْيَمَ إِلَّا رَسُولٌ قَدْ خَلَتْ مِنْ قَبْلِهِ الرُّسُلُ وَأُمَّهُ صِدْيَقَةُ كَانَتْ يَأْكُلُ الْبَطْنُ الطَّعَامَ أَنْظَرُ كَيْفَ نَبِيٍّ لَهُمُ الْآيَاتُ ثُمَّ أَنْظَرُنِي يُوقُونَ ﴿٧٥﴾

Aayadahanu waxay Caddayn Siday Nasaaro u Gaaloowday, oo ah inay Nabi Ciise Ilaah ku Sheegeen, oy Dheheen waa Ilaah Saddaxaad, Isagooy Dhabtu tahay inuu Allaah kali yahay wax la Wadaaga

Ilaahnimada Jirin, Ciddii wax la Wadaajisana Janno ka Dheertahay, Naarna uu Gali, Nabi Ciisanan yahay Addoon Eebe oo Rasuul ah Sidii Rasuuladii Hore, Hooyadiina Runlay Tahay ooyna ahaayeen kuwo wax Cuna, Balse day sida xaqa loogu Caddeeyey iyo Siday U dhumi. Saas darteed yey Doqonimo tahay in Eebe le Diido ama Ilaah kale la Sheego, Wanaag, Sharaf, iyo Jannona waxaa mudan Muslimka Toosan Siduu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) u Yidhi: Ma galo Jannada Ruuxaan Muslim ahayn. Al-Maa'idah (72-75).

76. Waxaad Dhahdaa ma waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow waxaan Hananin Dhib iyo Dheef (midna) Eebana Yahay Maqle Oge ah.

قُلْ أَتَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَمْلِكُ لَكُمْ ضَرًّا
وَلَا نَفْعًا وَاللَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٧٦﴾

77. Waxaad Dhahdaa Ehelu Kitaabow ha ku Xadgudbina Diintiinna si aan Xaq ahayn, hana Raacina hawada qoom Dhumay mar hore Dhumiyeyna wax badan kana Dhumay Jidka Toosna.

قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لَا تَغْلُوا فِي دِينِكُمْ غَيْرَ الْحَقِّ
وَلَا تَتَّبِعُوا أَهْوَاءَ قَوْمٍ قَدْ ضَلُّوا مِن قَبْلُ وَأَصْلُوا كَيْدًا
وَضَلُّوا عَن سَوَاءِ السَّبِيلِ ﴿٧٧﴾

78. Waa lagu Lacnaday Kuwii Gaalobay oo Banii Israa'iil ah Carrabka Daa'wuudd iyo Ciise Ibnu Maryama Arrintaasna waxaa ugu Wacan Caasinimadooda ahaayeen kuwo Xadgudba.

لُعِنَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِن بَنِي إِسْرَائِيلَ
عَلَى لِسَانِ دَاوُدَ وَعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ ذَلِكَ بِمَا
عَصَوْا وَكَانُوا يَعْتَدُونَ ﴿٧٨﴾

79. Waxayna ahaayeen kuwaan iska Reebayn Xumaan ay Falayaan, waxaa Xun waxay Falayeen.

كَانُوا لَا يَتَنَاهَوْنَ عَن مُّنْكَرٍ فَعَلُوهُ لَبِئْسَ
مَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ﴿٧٩﴾

80. Waxaad Arkaysaan wax badan oo ka mid ah oo ka Sokeeye Dhigan kuwo Gaalobay waxaa Xun waxay u Hormarsatay Naftoodu oo ah in Eebe u cadhooday, Cadaabkana ay ku Waari.

تَرَى كَيْفَ أَتَيْنَهُمُ ابْنَةَ مَرْيَمَ
وَمَا حَسِبُوا لِأَن يُرْسِلَ إِلَيْهَا مَوْجًا
مِّن مَّاءٍ لَّيْسَ مَا قَدَّمَتْ لَهُمْ أَنفُسُهُمْ
أَن سَخِطَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ وَفِي الْعَذَابِ هُمْ
خَالِدُونَ ﴿٨٠﴾

81. Hadday Yihiin kuwo Rumeyn Eebe iyo Nabiga iyo waxa lagu soo Dejiyey mayna Yeesheen Sokeeye Gaalo laakiin wax badan oo ka mid ah waa Faasiqiin.

وَلَوْ كَانُوا يُؤْمِنُونَ بِاللهِ وَالنَّبِيِّ وَمَا أُنزِلَ إِلَيْهِ
مَا اتَّخَذُوا هُمُ أَوْلِيَاءَ وَلَئِن كُنَّ كَثِيرًا
مِّنْهُمْ فَاسْفُوتٌ ﴿٨١﴾

Lacnaday Carrabkii Nabi Daawuud iyo Ciise Ibnu Maryama, Illeen Xumaanta iskama Reebi Jirine, waxaana jira kuwo Gaalada Sokeeye ka Dhigan, waase kuwo Eebe u Cadhooday oo ku waari Naarta, Illeen hadday Eebe iyo Nabiga Dhab u Rumeeyaan kamayna Yeesheen Sokeeye, Laakiin wax badan oo ka mid ah waa Faasiqiin.

Rasuulkuna (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Fara Wanaagga oo Reebea Xumaanta ka hor intaydaan intaad Ilaahay baridaan uusan idin Ajiibin.

Taasina waxay Muujin in wanaagga la faro Dadka Xumaantana laga Reebo, Jidka Gaaladana laga Fogaado. Al-Maa'idah (76-81).

82. Waxaad Ogaan kuwa Dadka u Daran Colnimada kuwa Rumeeyey (Xaqa) (Muslimiinta) Yuhuud iyo Mushrikiinta (Diin laawayaasha) waxaad Ogaan kuwa ugu soo Dhaw Jacayl kuwa Rumeeyey Xaqa (muslimiinta) inay yihiin kuwa dhihi waxaan nahay Nasaaro, Illeen waxaa ka mid ah qaysas iyo Raahibiin Ismana Kibriyaan.

﴿لَتَجِدَنَّ أَشَدَّ النَّاسِ عَدَاوَةً لِلَّذِينَ آمَنُوا الْيَهُودَ وَالَّذِينَ أَشْرَكُوا وَلَتَجِدَنَّ أَقْرَبَهُم مَّوَدَّةً لِلَّذِينَ آمَنُوا الَّذِينَ قَالُوا إِنَّا نَصْرِيُّ ذَلِكَ يَأْتِيهِمْ فَيَقْسِمُونَ وَيُرْسَبُونَ أَنَّهُمْ لَا يَسْتَكْبِرُونَ ﴿٨٢﴾﴾

83. Markay maqlaan waxaa lagu soo Dejiyey Rasuulkana waxaad arkaysaa indhahoodoo Ilmo ka Daadan waxay aqoonsadeen oo xaqa ah iyagoo dhihi Eebow waan Rumeynay ee nagu dhig (Yeel) kuwa marag furi (Xaqa qiri).

﴿وَإِذَا سَمِعُوا مَا أُنزِلَ إِلَى الرَّسُولِ تَرَى أَعْيُنَهُمْ تَفِيضُ مِنَ الدَّمْعِ مِمَّا عَدَوْا مِنَ الْحَقِّ يَقُولُونَ رَبَّنَا آمَنَّا فَاكْفِنَا مَعَ الشَّاهِدِينَ ﴿٨٣﴾﴾

84. Maxaannaan u rumeynaynin Eebe iyo waxa noo yimid oo xaq ah oonnaan u Damcaynin inuu na galiyo (naga yeelo) Ilaahanno qoomka Suuban la Jirkooda.

﴿وَمَا لَنَا لَا نُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَمَا جَاءَنَا مِنَ الْحَقِّ وَنَطْمَعُ أَنْ يُدْخِلَنَا رَبَّنَا مَعَ الْقَوْمِ الصَّالِحِينَ ﴿٨٤﴾﴾

85. wuuna ku Abaal marin Eebe waxay Dhaheen Jannooyin oy Socoto Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku Waari Dhexdeeda, Tassina waa Abaal marinta Samafalayaasha.

﴿فَأَنبَأَهُمُ اللَّهُ بِمَا قَالُوا وَجَنَّتِ النَّجْمُ مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ فَخَلِدِينَ فِيهَا وَذَلِكَ جَزَاءُ الْمُحْسِنِينَ ﴿٨٥﴾﴾

86. Kuwa Gaaloobay oo Beeniyey Aayaadkanaga Kuwaasu Waa Jaxiimo Ehelkeeda.

﴿وَالَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا أُولَٰئِكَ أَصْحَابُ الْجَحِيمِ ﴿٨٦﴾﴾

diinlaaweyaashu u qabaan Xaqa iyo Diinta Islaamka. iyo Muslimiinta, hase Yeeshee hadday Nasaaradu ugu Dhaqmi Injiil si Dhab ah oo sugan waa inay Noqdaan Sida Aayaduhu Sheegeen oo ka Dhawraan Colka iyo waxyeellada Muslimiinta iyo Diinta Islaamka, Haddii Kale kuma Dhaqmaan Injiil ee waa Yuhuud ama Mulxidiin Diin-Laawayaal ah, kuwaasna waxaa Xaqa u Diiday Xasad, Isla wayni, Xumaan Jecayl iyo Inay Xoriyad u Helaan si ay uga Dharjiyaan Naftooda wax Kastoo Xumaana oy Doonaan.

Waxaana Sugnaatay Hadduu la kaliyoobo Yuhuudi Ruux Muslim ah wuxuu Doonaa inuu Dilo. Taasina way Muuqataa had iyo Jeer, Waase in laysku Duubnaado lagana Digtoonaado, lagana Hortago. Al-Maa'idah (82-86).

87. Kuwa xaqa Rumeeyow ha Xarrimi-na Wanaagga (Xalaasha) Eebe Idiin Banneyey hana Xadgudbina, Eebe ma Jecla kuwa Xad gudbee.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَحْزَنُوا طَبِيتَ مَا أَهَلَ
اللَّهُ لَكُمْ وَلَا تَعْتَدُوا إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ
الْمُعْتَدِينَ ﴿٨٧﴾

88. Waxna ka Cuna Wuxuu Idinku Arzaaqay Eebe isagoo Xalaal Fiican ah kana Dhawrsada Eebe ee ah kaad Rumeysantihiin.

وَكُلُوا مِن مَّا رَزَقَكُمُ اللَّهُ حَلَلًا طَيِّبًا وَاتَّقُوا
اللَّهَ الَّذِي أَنْتُمْ بِهِ مُؤْمِنُونَ ﴿٨٨﴾

89. Eebe Idiin ma Qabto Dhaar Dan La'aaneed (Laqwi) Laakiin wuxuu idiin qaban Dhaartaad u Qasaddaan, Kafaaradeeduna waa Quudin Toban Miskiin (oo siisaan) kan u dhexeeya waxaad ku Quudisaan Ehekiinna ama Arrad Bixintooda ama Xorayn qoor, Ciddaan Helinna waxay Soomi Saddex Maalmood, Taasaana ah Kafaarada Dhaartiinna Markaad Dhaartaan, ee dhawra dhaartiinna Saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayadkiisa, waxaadna Mudantihiin inaad ku Mahdisaan.

لَا تَأْخُذْكُمْ أَنَّهُ بِاللَّعُونِ قِيمَتُهُ وَلَكِن
يَأْخُذْكُمْ بِمَا عَقَدْتُمُ الْاِيمَانَ فَكَفَرْتُمْ بِهِ
إِطْعَامَ عَشْرَةِ مَسْكِينٍ مِنْ أَوْسَطِ مَا نَطَعُونَ
أَهْلِيكُمْ أَوْ كِسْفَتُهُمْ أَوْ تَحْرِيرَ رِقَبَةٍ فَمَنْ لَمْ يَجِدْ
فَصِيَامَ ثَلَاثَةِ أَيَّامٍ ذَلِكَ كَفْرُهُ أَيْمَانُكُمْ إِذَا
حَلَفْتُمْ وَاحْفَظُوا أَيْمَانَكُمْ كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ
لَكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٨٩﴾

Ma Bannaana wax Eebe Banneyey in la Xarrimo, ama lagu Xad-Gudbo, Illeen Eebe ma Jecla kuwaas Xad-Gudbee, waana in Xalaasha Fiican la Cuno.

Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Waxay soo Degtay Mar Koox Asaxaabtii ah ay Damceen in Nolosha Adduunka Dhan ka Maraan, markaasuu Nabigu Mar Koox Asaxaabtii ah ay Damceen in Nolosha Adduunka Dhan ka Maraan, markaasuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Yidhi. Markii Loo Sheegay: Anigu Waan Soomi (Sunnaha) oon Marna Afuri, Marna waan Tukan (Sunnaha) marna waan Seexan, Haweenkana waan Guursan ee Ciddii Sunadayd (Wadadayda) qaadatana waa iga mid, Ciddaan qaadaninna iga Mid ma aha. (Ibnu Abii Xaatim).

Aayadda Kalana waxay ka Warrami inaan Eebe inoo qabanayn Dhaarta Carrabku xado ee midda loo qasdo umbaa laysu qaban, waxaana lagu kafaara Gutaa Haddaan la Falinnin Toban Miskiin quudintood ama arrad Bixintood ama Xorayn Qoor, waase in la Dhawraa Dhaarta Eebana wax walba wuu Caddayn inaad ku Mahdisaan. Al-Maa'idah (87-89).

90. Kuwa Xaqa Rumeeyow Khamrada, qamaarka, Sanamyada «Taagan», iyo Faalku waa uun Xumaan (Wasakh) oo Camal Shaydaana ee ka Fogaada inaad Liibaantaan.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِنَّمَا الْخَمْرُ وَالْمَيْسِرُ وَالْأَنْصَابُ
وَالْأَزْلَمُ رِجْسٌ مِّنْ عَمَلِ الشَّيْطَانِ فَاجْتَنِبُوهُ
لَعَلَّكُمْ تَفْلِحُونَ ﴿٤٠﴾

91. Wuxuu uun Dooni Shaydaanku inuu Idinku Dhextuuro Colnimo iyo isnac Khamrada iyo Qamaarka idinkana Celiyo Xusidda Eebe iyo salaadda ee ma ka Joogaysaan (ka Jooga).

إِنَّمَا يُرِيدُ الشَّيْطَانُ أَنْ يُوقِعَ بَيْنَكُمُ الْعِدَاةَ
وَالْبَغْضَاءَ فِي الْخَمْرِ وَالْمَيْسِرِ وَيَصُدَّكُمْ عَنْ
ذِكْرِ اللَّهِ وَعَنِ الصَّلَاةِ فَهَلْ أَنْتُمْ
مُنْتَهُونَ ﴿٤١﴾

92. Adeeca Eebe Adeecana Rasuulka Digtoonaadana, Haddaadse Jeedstaan Ogaada waxaa uun Rasuulkanaga Saaran Gaadhsiin Cad.

وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأَحْذَرُوا فَإِن
تَوَلَّيْتُمْ فَأَعْلَمُوا إِنَّمَا عَلَى رَسُولِنَا الْبَلَاغُ
الْمُبِينِ ﴿٤٢﴾

93. Dhib (Dambi) ma Saara kuwa Xaqa Rumeeyey oo Camal Fiican Falay waxay Quuteen hadday Dhawrsadaan oy Xaqa Dhab u Rumeeyaan Camal Fiicanna Falaan, oy Xumaanta ka Dhawrsadaan oy Xaqa Rumeeyaan, Haddana Dhawrsadaan samana falaan, Eebana wuxuu Jecelyahay Samo Falaayaasha.

لَيْسَ عَلَى الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ جُنَاحٌ
فِيمَا طَعِمُوا إِذْ مَا اتَّقَوْا ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ
ثُمَّ اتَّقَوْا ءَامَنُوا ثُمَّ اتَّقَوْا وَآخَسَوْا وَاللَّهُ
يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ ﴿٤٣﴾

Khamrada iyo Qamaarka, iyo wax u Gawricidda iyo Xuska Sanamyada La Taagay iyo Faalkuba waa waxyaalo xun oo Camal Shaydaana, oo Khayrka kaa Celin. Colnimo iyo Cadhana Beeri waana waa Jib inuu Ruuxa Muslimka ah ka Fogaado Isagoo Eebe iyo Rasuulkiisa Adeeci, Ciddii Xaqa ka Jeedsatana waxba Rasuulka kama Saara oon Gaadhsiin Cad ahayn, Dadkiise falay wax ka mid ah waxaas Intaan la Xarrimin Dambi ma Saara hadday Dhab Xaqa u Rumeeyaan ka dib oo Dhawrsadaan Camal fiicanna Falaan, illeen Eebaa Jecel sidaase, Xumaanta Khamrada, Qamaarka iyo waxa la midka ah wax qarsoon ma aha, waana Aakharo, Adduun, Caafimaad, Xoolo, Caqli iyo Sharaf waa, Inta Caqliga leh oo Dhanna waxay ku Kulmeen Xumaanta iyo waxyeelada Khamrada, waxaana ka warraamay Xaaraannimadeeda iyo waxyeeladeeda Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeeley) Waxaana Kamida Wax kastoo wax Waaliya waa Khamro waana Xaaraan. iyo Eebe ha Lacnado Khamrada, Kan Cabba, Kan Waraabiya, Kan Gada, Kan Gata, Kan Xambaara, Kan loo Xambaaro, Kan Miira, Kan loo Miiro iyo Kan Cuna Lacagteeda. Waxaa Wariyey (Imaam Axmed).

Bal day Xaalkeeda iyo Xumideeda, waataas Aragtida Islaamka ee Khamrada. wuxuuna Eebe Baneeyey waxyaalo Macaan oo Fiican oo la Cabbo, Maxayse ka heleen kuwa Baneeyey, waa uun Waalli, Cudur, Dil, Nabad-galyo Darro iyo Xumaan oo Dhan. Illen Khamro waa Hooiyada Xumaantee, Maxaa ka fiican Islaamka iyo Wuxuu Fari Waana Waajib in la Raaco. Al-Maa'idah (90-93).

94. Kuwa Xaqa Rumeeyow wuxuu idinku Imtixaami Eebe wax Ugaadha ka mid ah, oo Gaadhaan Gacmihiinnu iyo waramihiinnu in Eebe ogaado Cidda ka cabsata isagoo kali ah, Ciddiise xad gudubta intaas ka dib wuxuu Mudan Cadaab daran.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا لِيَلْبِغُوا لَكُمْ اللَّهُ يَشَاءُ مِنْ
الضَّيِّدِ تَنَالُهُ، وَأَيْدِيكُمْ وَرِمَاحُكُمْ لِيَعْلَمَ اللَّهُ مَنْ
يَخَافُهُ، يَا لَعِيبَ فَمَنْ أَعْتَدَىٰ بَعْدَ ذَلِكَ فَلَهُ عَذَابٌ
أَلِيمٌ ﴿١٤﴾

95. Kuwa Xaqa Rumeeyow ha Dilina Ugaadha idinkoo Xarman, Ciddiise Disha oo idinka mid ah si kas ah waxaa Saaran wuxuu Dilay wax la mid ah oo Xoolo ah oy Xukumi labo Caadil ah oo idinka mid ah isagoo ah Hadiyad Gaadhi Kacbada, ama Kafaaro gud Quudin Masaakiin ama wax u Dhigma oo Soon ah inuu Dhadhamiyo Ciqaabta amarkiisa, wuu idinka Saamaxay Eebe wixii horreeyey Ciddiise ku Noqota wuu ka aarsan Eebe, Ilaahayna waa Adkaade Aarsada.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَانْقَتَلُوا الضَّيِّدَ وَأَنْتُمْ
حُرْمٌ وَمَنْ قَتَلَهُ، مِنْكُمْ مُتَعَمِّدًا فَجَزَاءٌ مِّثْلُ مَا
قَتَلَ مِنَ النَّعَمِ يَحْكُمُ بِهِ ذَوَا عَدْلٍ مِنْكُمْ هَذَا يَبْلُغُ
الْكُفَّةَ أَوْ كَفْرَةٌ طَعَامُ مَسْكِينٍ أَوْ عَدْلٌ ذَلِكَ
صِيَامًا لِيَذُوقَ وَتَالَ أَمْرٌ وَعَقَا اللَّهُ عَمَّا سَلَفَ
وَمَنْ عَادَ فَيَنْتَقِمْ اللَّهُ مِنْهُ وَاللَّهُ عَزِيزٌ
ذُو نِقَامٍ ﴿١٥﴾

Ayayduhu waxay ka warrami in waqtiga la xarmado xajka ama Cumrada ay Reebantahay in Ugaadha la Laayo, waxaana jirtay inuu Eebe ku Imtixaamay Muslimiintii Arrintaas si loo Kala Caddaado Cidii saas Fashana way Xad-gudubtay, waxaana saaran inuu gudo Ugaadhuu Dilay wax la mid ah oo Xoolo ah, waxaana qiimayn Labo Caadil ah oo Muslimiinta ka mid ah, waxaana la geeyn Xaramka Makaan Sadaqo ahaan, haddii kale wuxuu quudin Masaakiin Qiimihiisa ama wuu Soomi si uu u Dhadhamiyo Ciqaabta Gafkiisa, intaan layska reebin wixii Dhacay waa ka Saamaxay Eebe, Cidii ku Noqotana wuu ka aarsan. Muqaatil Binu Xayaan wuxuu Yidhi: Waxay soo Deggen Cumradii Xudaybiyo, Taasina waxay ku Tusin inay Waajibtahay inuu Gawraco Waqtiga Ixraamka. Al-Maa'idah (94-95).

96. Waxaa Laydiin Baneeyey Ugaadhsiga Badda iyo Cunnadeeda idinkoo ku intifaaci iyo Socdaalba, (Idinkoo Xarman) waxaana Laydinka Reebay ka Ugaadhsiga Barriga intaad Xarmantihiin, ka Dhawrsada Eebaha Xaggiisa Laydiin soo Kulmin.

أَجَلٌ لِكُرْصِيدِ الْبَحْرِ وَطَعَامُهُ، مَتَلَعًا لَكُمْ
وَلِلسَّيْرَةِ وَخَرَمَ عَلَيْهِ كُرْصِيدَ الْبَرِّ مَا مَثَرَهُ حُرْمًا
وَأَنْفُوا اللَّهَ الَّذِي إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿١٦﴾

97. Wuxuu ka Yeelay Ilaahay Kacbada Bayd (Guriga) Xurmada Leh, Dhawrida dadka iyo Bilaha Xurmada leh iyo Hadyada iyo Tan la Calaameeyey (Hadyada Darteed) waan inaad Ogaataan in Eebe Ogyahay waxa ku Sugaan

* جَعَلَ اللَّهُ الْكَعْبَةَ الْبَيْتَ الْحَرَامَ فِيمَا
لِلنَّاسِ وَالشَّهْرَ الْحَرَامَ وَاللَّهْدَىٰ وَالْقَلْبَةَ لِلَّهِ
لِيَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ
وَأَنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿١٧﴾

Samooyink iyo Dhulka iyo in Eebe wax kasta Ogyahay.

98. Ogaada in Eebe Ciqaabtiisu Darantahay Eebana yahay Dambi Dhaafe Naxariista.

اعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ وَأَنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٩٨﴾

99. Ma Saarra Rasuulka waxaan Gaadhsiin ahayn, Eebana waa Ogyahay waxaad Muujinaysaan iyo waxaad Qariinaysaan.

مَا عَلَى الرَّسُولِ إِلَّا الْبَلَاغُ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا تُبْدُونَ وَمَا تَكْتُمُونَ ﴿٩٩﴾

Aayadahanna waxay ka warrami in Ilaahay u Banneeyey Muxrimka Xajka iyo Cumrada inuu Cuno waxa Badda laga soo Saaro, waxaase laga reebay ka Ugaadhsiga Barriga intay Xarmanyihiin waana inay ka Dhawrsadaan Eebaha Xaggiisa laysu soo Kulmin, Kacbadana wuxuu Ilaahay ka Yeelay Guri Sharaf leh oo Xurma leh, Dadkana Maslaxo, iyo Nabadgalyo ugu Sugantahay, Sidoo kale Bilaha Xurmaysan iyo Had-yadda Xaramka loo wado, Arrintaasna waxaa ugu wacan in Ilaahay Ogyahay waxa Samooyinka iyo Dhulka ku Sugaan, iyo wax kastaba, waana in la Ogaado in Eebe Ciqaab daranyahay, Naxariistana, Rasuulkana waxaan Gaadhsiinta Xaqa ahayn ma Saara, Eebana wuu Ogyahay waxa la Muujin iyo waxa la qarsanba.

Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi Isagoo Badda ka Warrami: waa Daahir Biyaheedu waana Xalaal Waxeeda Dhinta, (Imaam Axmed).

Waana waxyaalaha Eebe Dadka ugu Nicmeeyey, kuna Tusin Awoodda Eebe iyo Naxariistiisa oy Waajibna tahay in si Fiican oo Xaq iyo Caddaalad ah loogu Intifaaco laguna Aqoonsado Eebe iyo Deeqdiisa, Al-Maa'idah (96-99).

100. Waxaad Dhahdaa (Nabiyow) ma eka wax Xun iyo Wax Fiican Aadba la yaabtid Badnida kan Xune, kana dhawrsada Eebe Dadka Caqliga lahow inaad Liibaantaan.

قُلْ لَا يَسْتَوِي الْخَيْرُ وَالْأَلْبَابُ وَأَلْعَابُ كَثْرَةُ الْخَيْرِ فَاتَّقُوا اللَّهَ يَا أُولِي الْأَلْبَابِ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٠٠﴾

101. Kuwa Xaqa Rumeeyow ha Warsanina waxyaalo Haddii Laydiin Muujiyo idin Murug Galin, Haddaana Warsataan marka Quraanka la soo Dejin waa Laydiin Muujin, wuuna idinka Cafiyey Eebe Xaggeeda Ilaahay-na waa Dambi Dhaafe Dulbadan.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَتَّبِعُوا عَن أَشْيَاءَ إِن يُبَدَّ لَكُمْ نَسْوُكُمْ وَإِن تَسَّأَلُوا عَنْهَا حِينَ يُنَزَّلُ الْقُرْآنُ تُبَدَّ لَكُمْ عَفَا اللَّهُ عَنْهَا وَاللَّهُ غَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿١٠١﴾

102. Waxaa warsaday Qoom idinka Horreeyey Markaasay Noqdeen Kuwo ka Gaalooba (Markii loo Muujiyey).

فَدَسَّأَلَهَا قَوْمٌ مِّن قَبْلِكُمْ ثُمَّ أَصْبَحُوا بِهَا كَافِرِينَ ﴿١٠٢﴾

Aayadahan waxay Caddayn inaan Xumaan iyo Wanaag Sinayn, si kasto how Badnaato Xumaantuye, waana inay Dhawrsadaan Dadka Caqliga leh ee wax Garadka ah, Waxaana Xadiithu ku Sugnaatay: Wax Yar ood Gudato Shugrigiisa yaa kaaga Fiican wax badan oodan karin.

Taasina waxay ku tusin in waxa wanaagsani fiicanyahay wuxuu yahayba, waxa Xumina Qiimo daranyahay si kasto how batee ama wuxuu dooni ha Noqdee, waxaa kale oo aayadaha dambe ka warrami inaan la badinin Warsiga Macna la'aaneed iyo Ujeeddo Xumo Illeen Diintu waa Caddahaye, wixiise kaa Qarsooma waa inaad si Xushmad leh u Warsataa Ciddii Garan, waxayna Soo Degeen Aayaduhu mar Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) uu Khudbad Akhriinayey oo yidhi: Haddaad Qgtihiin waxaan Ogahay wax babanbaad ooyi lahaydeen, Wax yarna waad Qosii Lahaydeen Markaasay Asaxaabtii wajiga Dabooleen, Iyagoo ooyi, Markaasuu Nin warsaday Aabahay waa Kuma, Markaasay soo Degeen Aayaduhu, Illeen Yuhuud iyo Nasaaro iyo Gaaladii kalaba waxay Warsan Jireen Warsi Xun iyo Madax adayg wayna ka Gaaloobi jireen Wax warso Laakiin Si Maamuusa iyo wax loo baahanyahay oo Macquula oo wax Tari. Al-Maa'idah (100-102).

103. Ma Yeelin Eebe Xoolo Caanahooda Sanamyada loo Bixiyo (Baxiira) iyo Xoolo Sanamyada loo siidaayo (Saa'ibo) iyo Xoolo Dhadig oo Sanamyada lagu sadaqaysto (Wasiilo) iyo Riti Sanamyada loo Daayo (Xaam) Laakiin kuwii Gaalobay waxay ku Been abuuraa Eebe Been, Badankoodna wax ma Kasayaan.

مَا جَعَلَ اللَّهُ مِنْ بَحِيرَةٍ وَلَا سَائِبَةٍ وَلَا وَصِيَّةٍ
وَلَا حَامِرٍ لِلَّذِينَ كَفَرُوا يَقْتَرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ
وَأَكْثَرُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ ﴿١٠٣﴾

104. Marka loo Yidhaahdo u Kaalaya waxa Eebe soo Dejiyey iyo Xagga Rasuulkana waxay dhahaan waxaa nagu Filan waxaan ka Hellay Aabayaalkanno, oo Hadday aabayaalkood ayna wax Ogayn Hanuunsanayna (Ma raacayaan).

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا إِلَى مَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَإِلَى الرَّسُولِ قَالُوا
حَسْبُنَا مَا جَدْنَا عَلَيْهِ ءَابَاءَنَا أَوْ لَوْ كُنَّا
ءَابَاءَهُمْ لَا يَتْلَمَعُونَ شَيْئًا وَلَا يَهْتَدُونَ ﴿١٠٤﴾

105. Kuwa Xaqa Rumeeyow waxaa idin Saaran Naftiinna Idinma Dhibo Ciddii Dhunta Haddaad Hanuunsantaan, Xagga Eebe Umbaana Noqoshadiinnu tahay Dhammaan wuxuuna Idinka Warrami Waxaad Camal falayseen.

يَتَّيِبُهَا لِلَّذِينَ ءَامَنُوا عَلَيْكُمْ أَنفُسِكُمْ لَا يُضْرَكُ مَنْ
ضَلَّ إِذَا أَهْتَدَيْتُمْ إِلَى اللَّهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا
فِي نَبْئِكُمْ بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٠٥﴾

Jaahilintii waxay ahaayeen kuwo aan Eebe si Fiican ugu Xidhnayn, Jaahil oo dhan Caadadiisu waa Saas, Xoolahoodana waxay u Bixin jireen waxaan Dar Eebe ahayn, sida Sanamyada iyo waxa la midka ah, Caanaha yey u Bixin Jireen Neefkana way u siidayn Jireen Sanamyada, Hadday Dhadig isku Xijisiisana amam Ritigu wax badan Rimiyo waxay u Siidayn jireen Sanam Yada, waana Been Abuurasho aan Xujo lahayn, Marka Quraanka iyo Rasuulka loogu Yeedhana waxay Raacaan waxay Aabayaalkood oon wax ogayn hanuusanayna ka heleen, Taasina waa Ceeb weyn, Tan Kale Markaad toosnaato xaqana si Dhab ah Dadka u Fartid Cidii Diida oo Dhunta waxba kaama Saarra, mana aha Ujeedada Aayaduhu inaan Xaqa la Farin ee Naftaada Kaliya uun Xil kaa Saaranyahay, ma aha taas waa inaad Wanaag si Fiican u farto, Xumaantana si Fiican uga Reebto ka dib Xil kuma Saarra, Waxaa jirta in Dadka qaarkood si qalada u Fahmeen Aayaddan, oy Dhaheen ani Naftayda umbaa i saaran ee

maxaa Dad kale Hadduu Dhumi Iga Galay, ma jiro Cid kaligeed uun Toosnaan karta Dadkuna Dhunsanyahay, Illeen Dadku waa Xubin kaliya oo kale, waxaana Khaladkaas ka waaniyey Dadka Sayid Abu bakar oo Yidhi: Waxaad ku Fasirtaan Aayadda si aan sideedii ahayn, Wanaagga fara Xumaantana Reeba, Siduu Nabigu Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Al-Maa'idah (103-105).

106. Kuwa Xaqa Rumeeyow Maragga Dhexdiinna ah markii mid idinka mid ah Geeridu u Timaaddo oo uu Dardaarmi Waa Labo Caadil oo idinka mid ah, ama Labo Kale oon idinka mid ahayn, markaad Socdaal Tihiin oo Geeri idin Hesho, idinkoo u diidaya inay baxaan salaadda dabadeed iyaagoon marag furin, iyagoo ku Dhaaran Eebe, Haddaad Shakidaan inaannan ku Gadanayn Qiimo yar Qaraababa ha ahaadee, qarinna mayno maragga Eebe, Markaas aan noqonno kuwa Dambabay.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا شَهِدَةٌ بَيْنَكُمْ إِذَا حَضَرَ أَحَدُكُمْ
الْمَوْتُ حِينَ الْوَصِيَّةِ اثْنَانِ ذَوَا عَدْلٍ مِّنكُمْ
أَوْ إِخْرَانٌ مِنْ غَيْرِكُمْ إِنْ أَنْتُمْ صَرَفْتُمْ فِي الْأَرْضِ
فَأَصْبَحْتُمْ مَصِيبَةَ الْمَوْتِ تَحْسِبُونَهُمَا مِنْ بَعْدِ
الْصَّلَاةِ فَيَقْسِمَانِ بِاللَّهِ إِنْ أَرْتَبْتُمْ لَأَنْتَشِرِي
بِهِ نَمْنًا وَأَوْكَانَ دَأْبُ رَبِّي وَلَئِنْ كُنْتُمْ شَاهِدَةً اللَّهُ إِنَّا
إِذَا لَمِنَ الْأَشْخِينَ ﴿١٠٦﴾

107. Haddii la Ogaado inay Muteen Dambi waxaa Meeshooda Joogsan (oo la Dhaarin) Labo kale oo ah kuwa ugu Mudnaan Badan Dhaxalkiisa, wayna ku Dhaaran Eebe inuu Maraggoodu ka Xaqsanyahay Maraggooda, mana aanan xadgudbin, oo markaas aan Noqonno Daalimiin.

فَإِنْ عُثِرَ عَلَىٰ أَنَّهُمَا اسْتَحَقَّا إِثْمًا فَإِخْرَانٌ يَقُومَانِ
مَقَامَهُمَا مِنَ الَّذِينَ اسْتَحَقَّ عَلَيْهِمُ الْأَوْثَانِ
فَيَقْسِمَانِ بِاللَّهِ لَشَهِدَتْنَا أَخْرَمِينَ شَهِدْتَهُمَا وَمَا
اعْتَدَيْتَا إِنَّا إِذَا لَمِنَ الظَّالِمِينَ ﴿١٠٧﴾

108. Saasaana u Dhaw inay Maragga ula Yimaadaan Sidiisa Fiican ama ay ka Cabsadaan in la Diido Dhaartooda intay Dhaartaan ka dib, ee ka Dhawrsada Eebe Maqlana, Eebana ma hanuuniyo qoom Faasiqiina.

ذَلِكَ أَذَىٰ أَنْ يَأْتُوا بِاللَّشَّهَدَةِ عَلَىٰ وَجْهِهَا أَوْ يَخَافُونَ
أَنْ تُرَدَّ آيَاتُنَا بَعْدَ أَنْ يُنْفَرُوا وَأَتَوْا اللَّهَ وَأَسْمَعُوا اللَّهَ
لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْفَاسِقِينَ ﴿١٠٨﴾

Ayadahani waxay ka warrami in Hadduu Ruux Socdaala Geeri u Timaaddo uu ku Dardaarmi Labo Caadil oo Muslim ah hortood haddii la Waayana labo kale, Iyagoo la Dhaarin Salaado dabadood inay Run Sheegi ooyan wax Khayaamayn, oyna qarinnayn xaqa, Haddii la Shakiyana waxaa Badeli oo Dhaaran inay Xaqaas Muteen Labo ka mid ah kuwa ugu Dhaw kii Dhintay, waxayna ku Dhaaran in Iyagu ka runbadanyihiin, Saasaana u Toosan in Maragga ay u Gutaan iyadoo Saxiix ah si aan hadda ka Dib loo Celin Maraggooda, Waana Eebe in laga yaabo, Xaqana la Maqlo, illeen Ilaahay ma Hanuuniyo qoom Faasiqiin ah, Tassina waxay ku Tusin siduu Islaamku ugu Dadaali Dhawrida Xuquuqda Dadka, una qaddarin Dadka Diinta haysta, una fari Caddaalad, Eebe ka Yaabid, Sharaf Dhawrid iyo Wanaag ku Dadaalid. Al-Maa'idah (106-108).

109. (Ka warran) Maalintuu Kulmin Eebe Rasuulada kuna dhihi Maxaa laydiinku Jawaabay oy Dhihi ma Ogin adiga unbaa u Ogaal Badan waxa maqan.

* تَوَمَّ يَجْمَعُ اللَّهُ الرُّسُلَ فَيَقُولُ مَاذَا أُجِبْتُمْ قَالُوا لَا عِلْمَ لَنَا إِنَّكَ أَنْتَ عَلَّمَهُ الْغُيُوبَ ﴿١٠٩﴾

110. (Xusuuso) Markuu Eebe dhihi Ciise Binu Maryamow Xusuuso Nic-madaydii korkaaga ahayd iyo hooyadaaba markaana kugu Xoojinnay Ruuxii Daahirka ahaa (Jibriil) ood kula Hadlaysay Dadka sariir-ilmood iyo adoo meel dhaxaada, iyo Markaan ku Baray Kitaabka iyo Xigmadda, iyo Tawreed, Injiil, iyo Markaad ka Yeelaysay Dhoo-bada Sidii Shimbir Idankayga ood Afuufaysay oy Noqonaysay Shimbir Idankayga, ood Bogsiiinaysay indhoole ku dhashe iyo Baras laha Idankayga, ood soo Bixinaysay Maydka Idankayga, Markaan kaa celiyay Baniil Israa'iil markaad ula timid Xujooyin, oy Dheheen kuwii Gaaloobay oo ka mida kani waxaan Sixir ahayn ma aha.

إِذْ قَالَ اللَّهُ يَا عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ ادْكُرِي عِمَّتِي عَلَيْكَ وَعَلَىٰ وَالِدَتِكَ إِذْ أَبَدْنَاكَ بِرُوحِ الْقُدُسِ تُكَلِّمُ النَّاسَ فِي الْمَهْدِ وَكَهْلًا وَإِذْ عَلَّمْنَاكَ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَالتَّوْرَةَ وَالْإِنْجِيلَ وَإِذْ تَخْلُقُ مِنَ الطِّينِ كَهَيْئَةِ الطَّيْرِ بِإِذْنِي فَتَنفُخُ فِيهَا فَتَكُونُ طَيْرًا بِإِذْنِي وَتُبْرِئُ الْأَكْمَامَ وَالْأَبْرَصَ بِإِذْنِي وَإِذْ تُخْرِجُ الْمَوْتَىٰ بِإِذْنِي وَإِذْ كَفَفْتُ بَنِي إِسْرَائِيلَ عَنْكَ إِذْ جِئْتَهُم بِالْبَيِّنَاتِ فَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْهُمْ إِنْ هَذَا إِلَّا أَسْحَابٌ مُّزْمِنٌ ﴿١١٠﴾

111. Markaan u Waxyooday (ku-ilhaameeyey) Saaxiibbadii: Rumeeya aniga iyo Rassuulkayga oy dhaheen waan Rumaynay ee marag ka Noqo inaan Muslimiin nahay.

وَإِذْ أُوحِيَٰتِ إِلَى الْحَوَارِيِّينَ أَنْ آمِنُوا بِي وَبِرَسُولِي قَالُوا آمَنَّا وَأَشْهَدُ بِأَنْتَ مُسْلِمُونَ ﴿١١١﴾

Aayadahan waxay ka warrami Mucjisooyinkii Eebe Siileyey Nabi Ciise, Sida lagu soo Sheegay Suuradda Aal-Cimraan, Waxaas oo Mucjiso ahna waxay ku Tusin Awoodda Eebe, iyo inuu isaga uun Khayrku ka Yimaaddo, ayna Waajibtahay in si Dhab ah loo Caabudo loona Raaco Sharcigiisa. Nabi Ciisana waa Addoon Eebe oo la mid ah Nabiyada kale iyo Dadka, waana Doqonimo iyo Waalli in la siiyo Awood uusan Mudan ama lagu sheego Ilaahnimo Sida Nasaaradu Citiqaadiso'sidee Ruux Caqli leh u Caabudi wax Eebaha wax walba abuuray ka soo hadhay, waa layaab, Eebe nama Dhumiyoo. Aayadda Hore iyadu waxay ka warrami inuu Eebe Qiyaamada warsan Rasuulada isagoo oy waxay ugu Jawaabeen qoomkoodii iyaguna Xaalkoo Dhan waxay u Celiyeen Eebe, Khataarnimada Qiyaamada iyo Dhibaataada Taala, Taasina waxay ku Tusin inay Wajibtahay Dhab u Caabudidida iyo ku Xidhnaanta Eebe iyo Raacidda Rasuulada. Al-Maa'ida (109-111).

112. (Xusuuso) Markay Dheheen Xawaariiyintii Ciise Ibnu Maryamow Ma karaa Eebaha inuu nooga soo Dejiyo

إِذْ قَالَ الْحَوَارِيُّونَ يَا عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ هَلْ يَسْتَطِيعُ رَبُّكَ أَنْ يُنَزِّلَ عَلَيْنَا مَائِدَةً مِنَ السَّمَاءِ

Xeedho (Cunno) Samada wuxuuna yidhi ka Dhawrsada Eebe Haddaad Mu'miniin tihiin.

قَالَ اتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ كُنتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿١١٣﴾

113. waxay Dheheen waxaannu dooni inaan wax ka Cunno oy Xasisho Quluubtanadu oon Ogaanno inaad Run noo sheegi oonnu Noqonno Kuwa ka Marag kaca.

قَالُوا نُرِيدُ أَنْ نَأْكُلَ مِنْهَا وَنَطْمِئِنَّ قُلُوبُنَا وَنَعْلَمَ أَنْ قَدْ صَدَّقْتَنَا وَتَكُونُ عَلَيْنَا مِنَ الشَّاهِدِينَ ﴿١١٣﴾

114. wuxuu Yidhi Ciise Binu Maryama Ilaahayow Eebahanow Nooga soo Deji Xeedho Samada u Noqota Ciid kaannaga hore iyo Kaannaga Dambe iyo Aayad Xaggaaga ka ahaatay nana Arzaaq adaa arzaaqe u Khayr roone.

قَالَ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ اللَّهُمَّ رَبَّنَا أَنْزِلْ عَلَيْنَا مَائِدَةً مِنَ السَّمَاءِ تَكُونُ لَنَا عِيدًا لِأَوَّلِنَا وَآخِرِنَا وَآيَةً مِنْكَ وَآرْزُقْنَا وَأَنْتَ خَيْرُ الرَّازِقِينَ ﴿١١٤﴾

115. Wuxuuna Yidhi Eebe waan ku soo Dejin Korkiinna ee Ciddii ka Gaalowda ka dib oo idin ka mid ah waxaan Cadaabi Cadaab Aannan Cadaabayn Ruux Caalamka ka mid ah.

قَالَ اللَّهُ إِنِّي مُنَزَّلُهَا عَلَيْكُمْ فَمَنْ يَكْفُرْ بَعْدَ ذَلِكَ مِنْكُمْ فَإِنِّي أَخَذْتُهَا بِعَذَابِي وَلَا أُعَذِّبُهُ أَحَدًا مِنَ الْعَالَمِينَ ﴿١١٥﴾

Aayadahan waxay ka warrami Maa'iddada lagu Magacaabay Suuradda, waxayna ka mid tahay Mucjisoooyinka Eebe Nabi Ciise ku Mannaystay, Taasoo ah inay warsadeen in Eebe Samada Cunno uga soo Dejiyo, markuu Nabi Ciise ka waaniyeyna waxay Sheegeen inay dooni inay wax ka Cunaan, Qalbigooduna Xasilo, Ogaadaanna Runta Nabi Ciise, Maragna ay ka Noqdaan, Markuu Nabi Ciise Baryey Eebe inuu u soo Dejiyo, si ay Ciid ugu ahaato mid hore iyo mid Dambaba, iyo Calaamadba, Eebana wuxuu u Yaboohay inuu soo Dejin, Ciddiisa ka Gaaloowda wuxuu u Cadaabi Cadaab aan Cid kale la Cadaabin, Warsashada saasoo kale ahna waa laga Fiicanyahay, Ruuxu waa inuu Rumeeyo awoodda Eebe, wixii Anficina uu warsado, isagoon Madax adayg iyo Xumaan uga qasdin, Dhabtuna waa in Eebe wax walba ahaysiiyey, fali wuxuu Doono Nabiyadana ay Run Sheegi, oyna Waajibtahay in Dhab loo Rumeeyo Dhammaan lana Raaco Xaqay u Yeedhi, si loo Liibaano. Al-Maa'idah (112-115).

116. (Xusuuso) Markuu Yidhi Eebe, Ciise Binu Maryamow Ma adaa ku Yidhi Dadka ka Yeesha ani iyo Hooyaday Ilaahyo Eebe ka sokow, uuna Yidhi waad Nasahantahay Iguma Haboona inaan Dhaho Waxaan Xaq u lahayn, Haddaan idhina waad ogtahay, waxaadna Ogtahay waxa Naftayda ku sugan Aniguse ma Ogi waxa aad iga qarinyaso Adiga unbaa ah kan waxa Maqan Og.

وَإِذْ قَالَ اللَّهُ لِعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ أَنْتَ قُلْتَ لِلنَّاسِ اتَّخِذُوا مِنِّي وَآئِمِّي إِلَهَيْنِ مِن دُونِ اللَّهِ قَالَ سُبْحَانَكَ مَا يَكُونُ لِي أَنْ أَقُولَ مَا لَيْسَ لِي بِحَقٍّ إِن كُنتَ فَتَاهُ فَقَدْ عَلِمْتَهُ تَعْلَمَ مَا فِي نَفْسِي وَلَا أَعْلَمُ مَا فِي نَفْسِكَ إِنَّكَ أَنْتَ عَلَّامُ الْغُيُوبِ ﴿١١٦﴾

117. Kuma Dhihin waxaad i fartay waxaan ahayn, oo ah Caabuda Eebahay iyo Eebihiin, waxaana ku ahay marag intaan ku Noolahay Dhexdooda, markaad i oofsatana adaa Ilaaliye u ah, adi Umbaana wax walba Marag u ah.

مَآقَلْتُمْ لَهُمْ إِلَّا مَا أَمَرْتَنِي بِهِ أَنْ أَعْبُدُوا اللَّهَ رَبِّي وَرَبَّكُمْ وَكُنْتُمْ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا مَّا دُمْتُمْ فِيهِمْ فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِي كُنْتُ أَنْتَ الرَّقِيبَ عَلَيْهِمْ وَأَنْتَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴿١١٧﴾

118. Haddaad Cadaabto waa uun adoomadaadii, Haddaad u Dhaaftana adi umbaa Adkaade falsan ah.

إِنْ تَعُدُّهُمْ فَأِنَّهُمْ عِبَادُكَ وَإِنْ تَغْفِرْ لَهُمْ فَإِنَّكَ أَنْتَ أَعْرَبُ الْمَكِيدِ ﴿١١٨﴾

Aayadahani waa Gooddi Ilaahay u Jeedyey Nasaarada Caabuday Nabi Ciise iyo Hooyadiis, Isagoo Eebe ku Yidhi Nabi Ciise Ma adaa u Yidhi Dadka Ilaah ka Yeesha aniga iyo Hooyaday Eebe ka sokow, Ilaahayna wuu Ogyahay inuusan Nabi Ciise Farin Xaalkaas ee waa Cabsi galin Kuwii Caabuday, Nabi Ciisana wuxuu ku Jawaabay in Eebe ka Nasahanyahay waxaas, Xaqna uma lihi inaan Sheegto waxaanan Mudan, Haddaan idhi iyo Haddii kalaba waa Ogtahay, waxaad ogtahay Naftayda waxa ku Sugaan aniguse ma ogi waxa aad iga qarinyado, Adiga unbaa wax walba oo Maqan og. Waxaan Eebe caabuda ahayn ma farin, Intaan Dhex-joogay anaa u Marag ah haddaad I Oofsatana Adaa Ilaalin oo wax walba ka Marag ah, haddaad Cadaabtana waa Addoomadaadii, Haddaad u Dhaaftana Adigaa Adkaade Falsan ah.

Waana Kaas hadalkii Nabi Ciise, oo ah in Cibaadada Eebe Kaliya uu Farayey, Wax in la Caabudo Mudan oon Eebe ahayna ma Jiro, Isagoo Xaq u leh Cibaado iyo Waynaynba. Al-Maa'idah (116-118).

119. Wuxuu Yidhi Eebe Kani (Maanta) waa Maalinta ay Anfici kuwa Runta Sheega Runtoodu, waxaana u Sugnaaday Jannooyin ay Socoto Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku Waari Dhexdeeda Waligood, waxaana ka Raalli Noqday Eebe Iyana way ka Raalli Noqdeen, Taasina waa Liibaanta wayn.

قَالَ اللَّهُ هَذَا يَوْمٌ يَنْفَعُ الصَّالِحِينَ صِدْقُهُمْ لَهُمْ جَنَّاتٌ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ ذَلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿١١٩﴾

120. Eebaa Iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa ku Dhex sugan Eebana wax kasta wuu Karaa.

لِلَّهِ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا فِيهِنَّ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٢٠﴾

Eebana wuxuu Sheegay in Qiyaamada ay Anfici Runtu Ciddii Runle ahayd, oy Jannana Gali iyadoo ku Waari Eebaana ka Raalli Noqon Iyana way ka Raalli Noqon, Taasina waa Liibaan wayn, Xukunka Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa ku Dhex-jirana Eebaa Iska leh, wax walbana wuu Karaa, wax walbana Awooddiisay ku Jiraan, waxaana Run Sheegay Nabi Ciise iyo Inta la mid ah ee Cibaadada Eebe u qirtay, waxaana Been Sheegay Nasaarada iyo waxa la mid ah ee Caabudi wax Eebe ka Soo Hadhay. Al-Maa'idah (119-120).

Suurat Al-Ancaam



Magaca Eebe Yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Mahad Eebaa iska leh ahna kan Abuuray Samooyinka iyo Dhulka, Yee-layna Mugdiyada iyo Nuurka, Kuwa Gaaloobayse Eebahood yey wax la simi (la Caabudi).

الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَجَعَلَ
الظُّلُمَاتِ وَالنُّورَ ثُمَّ الَّذِينَ كَفَرُوا بِرَبِّهِمْ
يَعْدِلُونَ ﴿١﴾

2. Eebe waa kan idinka Abuuray Dhoobo Markaas Xukumay Ajal (Muddo), Ajal Magacaaban Yaana Agtiisa ah, idinkuse Gaalooy waad Shakisantihiiin.

هُوَ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ طِينٍ مُرَفَّضٍ أَجَلًا وَأَجَلٌ
مُسَمًّى عِنْدَهُ ثُمَّ أَنْشَأْتُمْ تَفَرُّونَ ﴿٢﴾

3. Eebe waa ka ay caabudaan Samooyinka waxa ku Sugan iyo waxa Dhulka ku Sugan, wuxuuna Ogyahay Qarsoodigiinna iyo Muujiskiinna, wuxuuna Ogyahay, waxaad kasbanaysaan.

وَهُوَ اللَّهُ فِي السَّمَوَاتِ وَفِي الْأَرْضِ يَعْلَمُ سِرَّكُمْ
وَجَهْرَكُمْ وَيَعْلَمُ مَا تَكْسِبُونَ ﴿٣﴾

Eebeheen wuxuu ku Billaabay Suuraddan Ammaantiisa iyo Siduu u Abuurey Cirka iyo Dhulka, iyo Mugdiga iyo Nuurka, dadkana ka ahaysiiyey Dhoobo «Aabahood Aadan», Muddana u Yeelay, mana Habboona in wax lala Caabudo, ama la Shakiyo, waana Ilaaha Xaqa ah ee Cirka waxa ku Sugan iyo Ilaaha Xaqa ah ee Dhulka waxa ku Sugan, Ognaa Qarsoodiga Dadka iyo Muujiskooda iyo waxay kasbanba.

Waxayna Aayaduhu Adkayn Ilaahnimada Eebe iyo Awooddiisa iyo Xaqnimadiisa Mudanyahayna Mahad, Cibaado iyo Raacidda Sharcigiisa. Al-Ancaam (1-3).

4. Aayaddii u Timaadda oo Aayadaha Eebahaa ka mid ah way ka Jeedsadaan.

وَمَا آتَيْنَهُمْ مِنْ آيَةٍ قَبْلَ أَنْ يَسْتَكْبِرُوا
عَنْهَا مُعْرِضِينَ ﴿٤﴾

5. Waxayna Dhab u Beeniyeen Xaqii Markuu u yimid Waxaase u Imaan Doona (Cidhibta) warkay ku Jees jee-sayeen.

فَقَدْ كَذَّبُوا بِالْحَقِّ لَمَّا جَاءَهُمْ فَسَوْفَ يَا بَنِي آدَمَ
مَا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ ﴿٥﴾

6. Miyeyna Arkayn intaan Halaagnay Hortood (wax badan) oo Qarniyo ah, oon ku Makaninay (siinnay) Dhulka waxaannaan idin Makanin (Siinnin) waxaan uga soo deynay Samada (Roob) Darar ah, Waxaana ka Yeellay Wabiyada kuwo Socda Dhexdooda, waanse Halaagnay Dambigooda Dartiis waxaana Ahaysiinnay Gadaashood Qarni kale.

أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ
أَلَمْ يَرَوْا كَرَاهِيَةَ مَا كُنَّا نَمُنُّ بِهُمْ

Aayadahaani waxay ka warrami Madax Adaygga Gaalada oo Mar kastoo ay u Timaaddo Mucjisad Beeniya oo Xaqa ka Jeedsada, Waxayse la Kulmi Doonaan Ciqaabta Madax adaygoodaas, Maxaa yeelay Hortood wax badanbaa la Halaagay kuwo ka Xoog badan oo loo Barwaaqeeeyey, Kuwa kalana lagu Baddalay, Taasina waxay ku Tusin inaan Cidna isku hallayn Awood, Illeen wax kastaba Eebaa ka Awood badane, oo ka Yeelay Dad wax Isbidayey Sheeko iyo Meel Madhan, iyo Raad Cidla ah. Al-Ancaam (4-6).

7. Haddaan kugu soo Dejinno Nabiyoow Kitaab Qoran oo ay ku Taabtaan Gacmahooda waxay odhan kuwii Gaa-loobay kani waxaan Sixir Cad ahayn ma aha.

وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ
وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَابًا فِي قُرْطَابٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ

8. Waxayna Dhihi maa lagu so Dejiyo Malag, Haddaan soo Dejinno Malagna waxaa la Dhammaynlahaa Amarka (Halaagga) lamana Sugeen.

وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا
وَقَالُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنْزَلْنَا مَلَكَ فَذُوقُوا

9. Haddaan ka Yeello Malagna waxaan ka Yeeli lahayn Nin, Markaasaan Iskaga Dari lahayn Xaalka siday isaga Dari Jireen.

وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا
وَلَوْ جَعَلْنَاهُ مَلَكَ الْعَالَمِينَ لَرَجَلًا ۖ وَلَكِنَّا

10. Waxaa Dhab ahaan loogu Jeesjeesay Rasuullo kaa Horreeyey Waxaana kuwii Jees jeesay ku dhacay (Ciqabti) waxay ku Jees jeeseen.

وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ
وَلَقَدْ آسَفْنَاهُ بِرُسُلِهِمْ ۖ فَبَايَعُوا بِالدِّينِ

11. Waxaad Dhahdaa ku Socda Dhulka oo Eega Siday Noqotay Cidhibtii Beeniyeaasah Xaqa.

فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ
فَلْيَسِّرُوا فِي الْأَرْضِ ثُمَّ أَنْظِرُوا كَيْفَ كَانَ

Aayadahaani waxay ka warrami Madax adaygga Gaalada iyo in si Kastoo Xaqa loo tuso ay Diidi kana Jeedsan, waxayna Dooni in Malag lagu soo Dejiyo, haddii lagu soo Dejiyana waxaa loo Yeeli lahaa Suuro Dad Inay Arkaan, markaasay Haddana Diidi lahaayeen, waxaana Shaqadooda ka mid ah Jees jees iyo Isla Weyni, waxayse Noqotaa Cidhibta Jees-Jeesaha Ciqaab iyo Halaag ee Dhulka mar si

aad u Ogaato waxa ku Dhacay Gaaladaas Xaqa Beeniyey, waxaase Habbon Rumaynta Xaqa iyo Raaciddiisa iyo ka Fogaanta Xumaanta iyo Xaqdiidka iyo Isla Waynida. Al-Ancaam (7-11).

12. Waxaad Dhahdaa yaa leh waxa ku Sugan Samooyinka iyo Dhulka, Dheh Eebe, wuxuuna Isasaaray Naxariis, wuxuuna idin kulmin Maalinta Qiyaame Shakina ma leh, kuwa Kha-saariyey Naftoodase ma Rumaynayaan.

قُلْ لِمَنْ مَافِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ قُلْ لِلَّهِ كَتَبَ
عَلَىٰ نَفْسِهِ الرَّحْمَةَ لِيَجْزِيَكَ إِلَىٰ يَوْمِ
الْقِيَامَةِ لَا رَيْبَ فِيهِ الَّذِينَ خَسِرُوا أَنفُسَهُمْ
فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٢﴾

13. Eebe waxaa u Sugnaaday waxa Xasila Habbenkii iyo Maalintiiba waa-na Maqle Oge ah.

﴿وَلَهُ مَا سَكَنَ فِي اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ وَهُوَ
السَّمِيعُ الْعَلِيمُ﴾ ﴿١٣﴾

14. Waxaad Dhahdaa ma wax Eebe ka soo Hadhay yaan ka yeelan wali (la Caabudo) Eebaana ah kan Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Isagaana wax Quudiya Lamase quudiyo, waxaad Dhahdaa waxaa lay Faray inaan Noq-do kan ugu Horreeya Cid Islaanta (Hogaansanta Ummaddan) oonan ka Midnoqonninna Mushrikiinta.

قُلْ أَغَيْرَ اللَّهِ أُتَّخَذُ وِلِيًّا فَاطِرِ السَّمَوَاتِ
وَالْأَرْضِ وَهُوَ يُطْعَمُهُ وَلَا يُطْعَمُ قُلْ إِنِّي أُمِرْتُ
أَنْ أَكُونَ أَوَّلَ مَنْ أَسَلَّمَ وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ
الْمُشْرِكِينَ ﴿١٤﴾

15. Waxaad dhahdaa anigu waxaan ka Cabsan Haddaan Caasiyo Eebahay Cadaab Maalin wayn.

قُلْ إِنِّي أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّي عَذَابَ يَوْمِ
عَظِيمٍ ﴿١٥﴾

16. Ciddii laga iilo Cadaabka Maalin-taas wuu u Naxariistay Eebe Taasina waa Liibaanta Cad.

مَنْ يُصِرْ فِي عُنُقِهِ مَوْجِدٌ فَقَدْ رَجَمَهُ، وَذَلِكَ الْقَوْمُ
الْمُؤْمِنُونَ ﴿١٦﴾

Ilaaheen wuxuu Nooga warrami inuu Leeyahay Xukunka Cirka iyo Dhulka iyo waxa U Dhaxeeya iyo in Naxariistiisu badantahay, Siduu Xadiith Qudsi ah ku Yidhi: Naxariistaydaa ka Badan Cadhadayda, Isagaana dadka u Soo Kulmin Qiyaamaha Shaki la'aan, Ciddii Khasaarisay Nafteedase ma rumayso, waxa Xasila Habcenka iyo Dharaarta iyo waxa dhaq-dhaqaaqana Eebaa iska leh, Waana maqle Oge ah, wax Xaq Lagu Caabudo oon Isaga ahayna ma jiro, waana Quudiye aan la Quudin, waana in Loo Hogaansamo, Gaaladana Laga Fogaado Illeen Cadaab Maalin wayn yaa Jirta Ciddii laga Ilaaliyana uu Liibaanaye. Al-Ancaam (12-16).

17. Hadduu ku Taabsiiyo Eebe Dhib wax Faydi ma jiro Isaga mooyee Hadduu ku Taabsiiyo Khayrna Isagaa wax Walba kara.

وَإِنْ يَمَسَّكَ اللَّهُ بِضُرٍّ فَلَا كَاشِفَ لَهُ إِلَّا هُوَ وَإِنْ
يَمَسَّكَ بِخَيْرٍ فَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٧﴾

18. Waan ka Adkaadaha Addomadiisa Korkooda waana Falsame Xeel Dheer.

وَهُوَ الْفَاهِرُ فَوْقَ عِبَادِهِ، وَهُوَ الْكَبِيرُ
الْحَكِيمُ ﴿١٨﴾

19. Waxaad Dhahdaa yaa ugu Wayn Marag waxaad Dhahdaa Eebaa Maraga Dhexdeenna ah, waxaana lay waxyooday Quraankan inaan idiinku Digo Idinka iyo cidduu Gaadho, Idinku ma waxaad Marag Furaysaan Inay Eebe la Jiraan Ilaahyo kale, waxaad Dhahdaa ma Marag Furayo (Saas) Waxaad Dhahdaa Alle waa macbuudka kali ah ee cibaada Naga mudan. Anuguna waxaan ka Bari ahay waxaad la Wadaajinaysaan.

قُلْ أَيُّ شَيْءٍ أَكْبَرُ شَهَادَةً قُلْ اللَّهُ شَهِيدِيَّ وَبَيْنَكَ وَأُوحِيَّ إِلَىٰ هَذَا الْقُرْآنِ لَأُنذِرَكُمْ بِهِ وَمَنْ بَلَغَ أَتَيْكُمْ لَشَهَادَتِي أَنْ مَعَ اللَّهِ إِلَهَةٌ أُخْرَىٰ قُلْ لَا أَشْهَدُ قُلْ إِنَّمَا هُوَ إِلَهٌ وَاحِدٌ وَإِنِّي بَرِيءٌ مِمَّا تُشْرِكُونَ ﴿١٩﴾

20. Kuwaan Siinnay Kitaabka Waxay u Yaqaannaan Nabiga (Xaqnimadiisa) Siday u Yaqaannaan Caruurtooda, kuwa Khasariyey Naftoodana ma Rumeeyaan (Xaqa).

الَّذِينَ اتَّخَذُوا الْكُتُبَ بَهْرَفُونَ، كَمَا يَهْرَفُونَ أَبْنَاءَهُمْ
الَّذِينَ خَسِرُوا أَنفُسَهُمْ فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٢٠﴾

21. Wax ka Dulmi Badanna ma jirto cid ku abuurtay Eebe Been ama beeniyey Aayaadkiisa mana Liibaanto Daalimiintu.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ بِآيَاتِهِ
إِنَّهُ لَا يَفْقَهُ الْظَالِمُونَ ﴿٢١﴾

Eebaa Hanta Nacfi iyo dhibba Isagaana wax kasta kara, Awooddana leh, maragna isagaa u wayn, Quraankuna waa Digniinta Caalamka, Alle mooyee macbuud kaloo xaqlugu caabudo ma jiro, Ehelu Kitaabkana (Yuhuud iyo Nasaare weeye) way Yaqaannaan Xaqnimada Quraanka iyo Nabiga Siday Carruurtooda u Yaqaannaan, kuwa Naftooda Khasariyayse wax ma Rumeeyaan, Cid ka Dulmi badanna ma jirto Ruux ku Been Abuurtay Eebe ama Beeniyey Aayaadkiisa, Daalimna ma Liibaano, waxaa Sugnaatay Xadiith ah: Wax ka Gaadhsiiya Eebe, Ruuxii Gaadhsiiyey Aayad Kitaabka Eebe ah wuu Gaadhsiiyey Amarkii Eebe. Al-Ancaam (17-21).

22. Ka Warran Maalintaan Kulmineyno (Dadka) Dhammaan Markaas aan ku Dhahayno Kuwii la Wadaajiyey Aaway kuwaad la Wadaajiseen (Eebe Cibaadada) aadna ahaydeen kuwo Sheegan (Inay wax tari).

وَيَوْمَ نَحْشُرُهُمْ جِيعًا ثُمَّ نَقُولُ لِلَّذِينَ أَشْرَكُوا إِنَّا سُرْنَاكُمْ
وَلَا نَكْفُرُهُمْ قَوْمًا ﴿٢٢﴾

23. Markaas Xujadoodii ma ahayn inay Dhahaan mooyee: Eebaan ku Dhaarannaye Maannaan ahayn Mushrikiin (Wax la wadaajiya).

ثُمَّ لَوْ تَكُنْ فِتْنَتُهُمْ إِلَّا أَن قَالُوا وَاللَّهِ رَبَّنَا مَا كُنَّا
مُشْرِكِينَ ﴿٢٣﴾

24. Bal day say ugu beensheegeen

أَنْظُرْ كَيْفَ كَذَّبُوا عَنِ النَّسِيِّ هُمْ وَصَلَّ عَنْهُمْ مَا كَانُوا

Naftooda ugana Dhumay waxay Been Abuuran jireen.

يَقْرُونَ ﴿٤٤﴾

25. Waxaa ka mida kuwo ku Dhagaysan waxaana yeellay Quluubtooda Dabool inay kasaan (Quraaka) Dhagahoodana waxaan Yeellay Culays, Hadday Arkaan Aayaad kasta ma Rumaynayaan, Markay kuu Yimaaddaanna way kula Murmaan iyagoo dhihi kuwii Gaalobay kani (Quraan-ku) ma aha waxaan warkii Kuwii Hore ahayn.

وَمِنْهُمْ مَّن يَسْتَمِعُ إِلَيْكَ وَجَعَلْنَا عَلَى قُلُوبِهِمْ أَكِنَّةً أَنْ يَفْقَهُوهُ وَفِي آذَانِهِمْ وَقْرًا وَإِنْ يَرَوْا كَلِمَةً أَيَّةً لَا يُؤْمِنُ بِهَا حَتَّىٰ إِذَا جَاءَهُمْ لَوْ كُنُوا يُقُولُونَ الَّذِينَ كَفَرُوا وَإِنْ هَذَا إِلَّا أَسَاطِيرُ الْأَوَّلِينَ ﴿٥٥﴾

26. Waxayna ka Reebi Dadka rumaynta Nabiga iyaguna way ka Fogaan mana halaagayaan waxaan Naftooda ahayn, mase Oga.

وَهُمْ يَهَيِّجُونَ عَنْهُ وَيَعَنَّ عَنْهُ وَإِنْ يُهْلِكُونَ إِلَّا أَنفُسَهُمْ وَمَا يَشْعُرُونَ ﴿٥٦﴾

Qiyaamada wuu soo Kulmin Eebe Gaalada iyo waxay Caabudayeen, wayna Inkiraan, waase beenin Naftoodu, Waxaa ka mid ahaa Gaaladii kuwo Dhagaysan Akhriska Quraanka lagan yeelay quluubtooda Dabool, Dhagahoodana Culays, Aayad kastooy Arkaanna ma Rumeeyaan, Markay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ay U yimaaddaanna way la Murmaan iyagoo ku Sheegi Quraanka wararkii Hore, Dadkana way ka reebi Quraanka inay Rumeeyaan iyaguna way ka Fogaan, waxaan Naftooda ahaynna ma halaagaan, mase Kasayaan. Al-Ancaam (22-26).

27. Haddaad aragto Marka la Joojin Gaalada Naarta Korkeeda oy Dhihi Shallaytee Maa inala Celiyo oo aanaan Beenin Aayaadka Eebahanno oo Noqonno Kuwa Rumeeyey (waxaad arki lahayd arrin Wayn).

وَلَوْ تَرَىٰ إِذْ يَقُولُوا عَلَى النَّارِ قَالُوا يَا بَنِي آدَمَ وَلَا تَكُذِبْ يَا بَنِي آدَمَ وَنَكُونُ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٥٧﴾

28. Waxaase U Muuqday waxay Qari-nayeen horay, haddii la Celiyana waxay ku Noqon lahaayeen wixii laga Reebay waana Beenaalayaal.

بَلْ بَدَأَ اللَّهُ تَجَاوُزًا لِّمَنْ هُمْ مِنْ قَبْلُ وَوَرُدُّوا أَلْعَادُوا لِعَانُوهُمْ عَذَابُهُمْ وَلَهُمْ لَكُذُوبٌ ﴿٥٨﴾

29. Waxay dhihi wax kale ma jiro ee waannu ku Noolaan Adduunyada Nalamana soo Bixinaayo.

وَقَالُوا إِنَّا مِنَ الْآحِسَاتِنَا الَّذِينَ آتَيْنَا مِنْ بَيْنِ أَيْدِيهِمْ وَمَا نَحْنُ بِمَبْعُوثِينَ ﴿٥٩﴾

30. Haddad Aragto Marka la hor Joojiyo Eebahood oo ku Dhaho Miyuuna kan Xaq ahayn, oy Dhahaan

وَلَوْ تَرَىٰ إِذْ يَقُولُوا عَلَىٰ رَبِّهِمْ قَالَ آتَيْتُمْ هَذَا بِالْحَقِّ قَالُوا تِلْكَ رَبِّنَا قَالُوا فَذُقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنتُمْ

waa Xaq Eebaan ku Dhaaranaye oo uu ku dhaho Dhadhamiya Cadaabka Gaalnimadiinna Darteed (Waxaad arki arrin wayn).

تَكْفُرُونَ ﴿٣٠﴾

Eebe wuxuu ka Warrami Xaalka Gaalada markay Joogaan Qiyaamada, Taasoo ah inay Calaacali oy Dooni in Dib loo Celiyo si ay u Rumeeyaan, waxaase Dhab ah Haddii la Celiyanan inay Beenin lahaayeen waana Beenaalayaal, waxayna Sheegan inay iska Noolaan lana soo Bixinaynin, waase la Guulguuli Qiyaamada wuxuuna ku Dhammaan Xaalku in lagu Dhoho Dhadhamiya Cadaabka Gaalnimadiinna Darteed.

Maalinta Qiyaame yeyna Kale Caddaan Xaqa iyo Xumaantu waana Tay wax walba kala Soocmi, Labo Waddana la kala Qaadi Janno iyo Naar. Al-Ancaam (27-30).

31. Waxaa Dhab u Khasaaray Kuwa Beeniyey la Kulanka Eebe markay ugu Timaaddo Saacadda (Qiyaame) si kada ahna waxay Dhahaan Shallaytadanno waxaan ku Gabood fallay Dhexdeeda, waxayna ku Xambaari Dambigooda Dhabarkooda waxaana Xumaanbadan waxay Xambaari.

فَدَحَسِرَ الَّذِينَ كَذَبُوا بِلِقَاءِ اللَّهِ حَتَّىٰ إِذَا جَاءَهُمْ
السَّاعَةُ بَغْتَةً قَالُوا يَحْسِرُ تَنَاغَلَىٰ مَا فَرَّطْنَا فِيهَا
وَهُمْ يَحْمِلُونَ أَوْزَارَهُمْ عَلَىٰ ظُهُورِهِمْ ۗ أَلَا سَاءَ
مَا يَزِرُونَ ﴿٣١﴾

32. Noloshu Adduunyana ma aha waxaan Ciyaar iyo Madadaalo ahayn Guriga Aakharaana u Khayr roon kuwa Dhawrsan ee Miyeydaan wax kasayn.

وَمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا إِلَّا لَٰعِبٌ وَهْوُ ۖ وَلَدَارُ الْآٰخِرَةِ
حَيْرٌ ۗ لِّلَّذِينَ يَتَّقُونَ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٣٢﴾

33. Waxaan Ognahay inuu ku Walba-haarin waxay Sheegi Dhab ahaan kuu-ma Beeninayaan Laakiin Daalimiintu Aayaadka Eebe yey Diidi.

قَدْ نَعْلَمُ إِنَّهُ لَيَحْزَنُكَ الَّذِي يَقُولُونَ فَإِنَّهُمْ
لَا يَكَادُونَكَ ۖ وَلَكِنَّ الظَّٰلِمِينَ بَيَّاتِ اللَّهُ
يَجْحَدُونَ ﴿٣٣﴾

Eebeheen wuxuu Noo Sheegi Khasaaraha kuwa Beeniya Saacadda Qiyaame intay uga Timaaddo Kado, oo Shalleeytoodaan waxay Faleen ee Xumaa iyagoo Xambaarsan Dambigoodii, waxaa Sugnaaday in Camalka Xun uu Suuro Xun iyo Suudh Xuu ugu Imaan Saaxiibkiis, uuna Dhabarka ka fuuli oo Qiyaamada tagi Isagoo Xambaarsan.

Tan kale noloshu Adduun waa Ciyaar ee Guriga Aakharo yaa u Khayr roon kuwa Xumaanta ka Dhawsada.

waxaana jirtay in warka Gaaladu walbahaar Galin jirtay Rasuulka (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) hase yeeshee Dhab ahaan uma Beenayn Isaga ee waxay diidayeen uun Aayaadka Eebe iyo Xaqa waxaa jirtay inuu Abu Jahal la Kulmay Nabiga Maalin uuna Gacan qaaday markaas lagu Yidhi war ma kaas Leexday yaad gacaqaadi, markaas uu Yidhi: Eebaan ku Dhaartaye waxaan ogahay inuu Nabi Yahay, Laakiin Goormaan Cabdi Manaaf u noqonay Daba gal.

waxaana jirtay inay Abuu Jahal iyo Abuu Sufyaan iyo Akhnas u kala Dhuumanijireen Dhagaysiga Quraanka. Saasana u Aragtaa say u Khayaamayeen Dadka kale, oo ugu Sheegi jireen Beenta.

Al-Ancaam (31-33).

34. Waxaa Dhab loo Beeniyey Rasuullo kaa Horreeyey waana ku Samreen wixii lagu Beeniyey waana la Dhibay intuu uga Yimaaddo Gargaarkannagu wax bedeli Hadalka Eebana ma jiro, waxaana ku soo Gaadhay Warkii Rasuuladii.

وَلَقَدْ كُذِّبَتْ رُسُلٌ مِنْ قَبْلِكَ فَصَبَرُوا عَلَىٰ مَا كُذِّبُوا
وَأُوذُوا وَخَسِرَ أَهْلُهُمْ فَصَبَرُوا وَلَا يُبَدِّلُ لِكَلِمَاتِ اللَّهِ
وَلَقَدْ جَاءَ لَوْ مِنْ تِبْيَانِ الْغُرُوبِ ﴿٢٤﴾

35. Hadday kugu Waynaatay (Cuslaatay) Jeedsigoodu haddaad karto inaad god ka Yeelato Dhulka ama Sallaan Samada ood Aayad u keentid (Samee) Hadduu Doono Eebana wuxuu ku kulmin lahaa hanuunka ee ha ka mid noqonin Jaahiliintal.

وَإِنْ كَانَ كِبَرَ عَلَيْكَ إِعْرَاضُهُمْ فَإِنْ اشْتَغَفْتَ أَنْ
تَتَّبِعِيَ فَقَا فِي الْأَرْضِ أَوْ سَمَا فِي السَّمَاءِ فَتَأْتِيَهُمْ
بَيِّنَاتٌ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَمَعَهُمْ عَلَى الْهُدَىٰ فَلَا
تَكُونُ مِنَ الْغَافِلِينَ ﴿٢٥﴾

36. Waxaa uun Ajiibi Ogolaan Xaqa kuwa Maqli, kuwa Dhintayse waxaa soo Bixin Eebe Xaggiisaana loo Celin.

* إِنَّمَا يَسْتَجِيبُ الَّذِينَ يَسْمَعُونَ وَالْمَوْتَىٰ يَبْعَثُهُمْ
اللَّهُ تَبَارَكَ لَهُ يُرْجَعُونَ ﴿٢٦﴾

37. Waxay Dhaheen maxaa loogu soo Dejin waayey «Mucjisad» Aayad Xagga Eebihis, waxaad Dhaahdaa Eebe waa karaa inuu soo Dejiyo Aayad Badan-koodse ma Oga.

وَقَالُوا لَوْلَا نُزِّلَ عَلَيْهِ آيَاتٌ مِنْ رَبِّهِ قُلْ إِنَّ اللَّهَ
قَادِرٌ عَلَىٰ أَنْ يُنَزِّلَ آيَاتٍ وَلَٰكِنْ أَكْثَرُهُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢٧﴾

Aayadahan sida Aayado kale oo ku Badan Quraanka waa Samirsiin Nabiga iyo Calool adkaysiin, Wuxuuna Eebe u Yaboohay Gargaar, Saas darteed waa inuu Nabigu iska Fududeeyo Xaalkooda, ILLeen Dhulka Intuu Godad ka Jeexdo ama Cirka Sallaan ugu koro uma keeni karo Aayade, Awooddana Eebaa iska leh Hadduu Doonana wuxuu Dadka ku Kulmin Hanuunka ee ha ka mid Noqonin Kuwaan wax Ogayn Yuu Eebe ku Yidhi, Xaqana waxaa maqla kuwa Qalbigoodu Noolyahay, Gaalo Qalbiga ka Dhimatayse wax ma maqlaan, waxaase loo soo Kulmin Qiyaamaha, Waxayna Codsanjireen Aayad loo soo Dejiyo, Eebana wuu Karaa soo Dejinteeda Badankoodse wax ma oga. Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Wuxuu Jeclaa Nabigu in Dadka Dhammaan Xaqa Rumeeyaan, Eebaase u warramay inuu Rumeyn uun Ruuxuu Eebe Doono oo Toosiyo. Al-Ancaam (34-37).

38. Wax ku Socda Dhulka ama Shimbir ku Duuli Garbihiisa oo Dhan waa umado Idinla mid ah, waxba kagama aanan tagin Kitaabka, waxaana loo soo Kulmin Dadka Xagga Eebahood.

وَمَا مِنْ دَابَّةٍ فِي الْأَرْضِ وَلَا طَيْرٍ يَطِيرُ بِجَنَاحَيْهِ
إِلَّا أُمَّةٌ أَمْثَلُهُمْ مَا قَرَأْتَ فِي الْكِتَابِ مِنْ حَقٍّ وَمَا
إِلَّا رَبُّهُمْ يُحْشَرُونَ ﴿٢٨﴾

39. Kuwa Beeniyey Aayadkanaga waa Dhaga La'yihiin oo Af la'yihiin Mugdibayna ku Suganyihiin, cidduu Doono wuu Dhumiya Eebe Tuu Doonana wuxuu Yeelaa Jid Toosan.

وَالَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا صُمُّوا وَبُكْرُوا فِي الظُّلُمَاتِ
مَنْ يَسْتَلِ اللَّهُ يُضِلَّهُ وَمَنْ يَشَأْ يُجْعَلْهُ عَلَى صِرَاطٍ
مُسْتَقِيمٍ ﴿٢٩﴾

40. Waxaad Dhahdaa Bal ka warrama hadduu idiin Yimaaddo Cadaabka Eebe ama idiin timaadda Saacaddu (Qiyaame) wax Eebe kasoo hadhay Miyaad Baryeysaan haddaad Runshee-gaysaan.

قُلْ أَرَأَيْتُمْ كَيْفَ أَنْتُمْ عَذَابُ اللَّهِ أَوْ أَنْتُمْ
السَّاعَةَ أَعْبَرُ اللَّهُ تَدْعُونَ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٤٠﴾

41. Isaga unbaana Baryeysaan oo Faydi waxaad ka baryeysaan hadduu Doono, waadna Halmaamysaan waxaad la Wa-daajinaysaan.

بَلْ إِيَّاهُ تَدْعُونَ فَيَكْشِفُ مَا تَدْعُونَ إِلَيْهِ إِنْ شَاءَ
وَتَسْوُونَ مَا نَشَاءُ لَكُمْ ﴿٤١﴾

Abuurka Eebe waa Badanyahay, Kitaabkiisana wax kasta oo wax Anfaca wuu ku Sheegay, Cid walbana waa la horkeeni Eebe, waxaana Sugnaaday in la Soo Kulmin Xayawaanka oo loo Qisaasi midda Geeska leh tii Seenayada ahayd oy Hardiday, Gaalada Xaqa Diidanna waa wax Dhago la' oo afla' oo Mugdi ku jira, Cidduu Doonana Eebe wuu Hanuunin, tuu Doonana wuu Dhumin. Marka Gaalada Cadaabka Eebe u Yimaaddo ama Qiyaamadu waxaan Isaga ahayn ma Baryaan, isaga unbaana Fayda Dhibka Hadduu Doono, waana la Halmaami waxa ka soo hadhay oo Adduunka lagu Caabudi Jiray waxna laga dayi Jiray, Saasayna Waajib u tahay in Eebe uun la Caabudo, Sharcigiisana la Raaco oo lagu Dhaqmo si Dhab ah, ILLeen isagaa Jidkii Liibaanta iyo Guusha ahe, waxa ka soo Hadhayna waa Khasaare. Al-Ancaam (38-41).

42. Waxaan u Dirray (Rasuul) Umma-do idinka Horreeyey waxaanna ku qabannay Dhibaato iyo Cudur bal inay Baryaan (Eebe).

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا إِلَىٰ أُمَمٍ مِّن قَبْلِكَ فَأَخَذْنَاهُمْ
بِالْبَأْسَاءِ وَالضَّرَّاءِ لَعَالَهُمْ يُتَضَرَّعُونَ ﴿٤٢﴾

43. Maa Markuu u Yimaaddo Dhibku ay baryaan (Eebe), Waxaase ingagtay Quluubtoodii, wuxuuna u Qurxiyey Shaydaanku waxay Falayeen.

فَلَوْلَا إِذْ جَاءَهُمْ بَأْسُنَا تَضَرَّعُوا وَلَكِنْ قَسَتْ قُلُوبُهُمْ
وَزَيَّنَّ لَهُمُ الشَّيْطَانُ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

44. Markay Halmaameen (Ka Jeedsadeen) wixii lagu Waaniyey Yaan u Furray Korkooda irridaha wax Kasta, Markay ku Farxaan waxaa la Siiyey yaan ku qabanna kado, Markaasay ahaadaan kuwo Quusta.

فَلَمَّا نَسُوا مَا كُفِّرُوا بِهِ فَتَحْنَا عَلَيْهِمُ أَبْوَابَ
كُلِّ شَيْءٍ حَتَّىٰ إِذَا فَرِحُوا بِمَا أُوتُوا أَخَذْتَهُمْ
بَغْتَةً فَإِذَا هُمْ مُبْلِسُونَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaana la Gooyey Cidhibta Qoomkii Dulmiga Falay, Mahadna Eebaa iska leh ah Eebaha Caalamka.

فَقَطَّعَ دَابِرَ الْقَوْمِ الَّذِينَ ظَلَمُوا وَالْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ
الْعَالَمِينَ ﴿٤٥﴾

Ilaahay Ummado Badan oo hore yuu Nabiyo u Diray, kuna qaban jiray Dhibaato iyo Cudur, si ay Eebe u Xusuustaan, waxaase Ingagay Qalbigoodii oo Shaydaanbaa wax u Qurxiyey, Markay Xaqii ka Jeedsadeenna waxaa loo Furay wax kasta (oo Shuqliya), markay ku Farxaanna waxa la Siiyey waxaan

ku qabannaa Kado Markaasay quustaan, waxaana la Cidhibtiray Gaaladii, Mahadna Eebaa iska leh, waxaana Habboon in marka Eebe wax ku siiyo aad ku Aqoonsatid oo ku Mahadsiid ee ma habboona inaad ku Kibirtid ood la Boodboodid.

Xasan Al-Basri wuxuu Yidhi: Ciddii Eebe u Waasiciyo Rizqiga oon Ogaan in la Magri, oo la Sasabi waa Midaan wax Garad, ahayn.

Qataadana wuxuu Yidhi: Waxaa la Halaagaa Dadka Markay Kibraan oy Shuqliso Nicmadu oy ku Sirnaa Eebe iyo Nicmadiisa waxaana Saas Noqda Cid Xaqa ka Leexatay. Al-Ancaam (42-45).

46. Waxaad Dhahdaa Bal Warrama Hadduu Eebe Qabto Maqalkiinna iyo Araggiinna oo Daboolo Quluubtiinna, waa Ilaahee Allaah ka soo Hadhay ee idiin keeni, Day Sidaan u Cel-Celinno Aayaadka Kadibna ay u jeedsanayaan.

قُلْ أَرَأَيْتُمْ إِنْ أَخَذَ اللَّهُ سَمْعَكُمْ وَأَبْصَارَكُمْ وَخَمَرَ عَلَى
قُلُوبِكُمْ مَنْ إِلَهٌ غَيْرُ اللَّهِ يَأْتِيكُمْ بِهِ أَنْظَرَكُمْ كَيْفَ
نُصِرُ الْآيَاتِ ثُمَّ هُمْ يَصْدِفُونَ ﴿٤٦﴾

47. Waxaad Dhahdaa Bal Warrama hadduu Idiinku Yimaaddo Cadaabka Eebe Kado ama Caddaan miyaa la Halaagaa waxaan Qoomka Daalimiinta Ahayn.

قُلْ أَرَأَيْتُمْ إِنْ أَنْتُمْ عَدَابَ اللَّهِ بَعْتَهُ أَوْ جَهْرَةً
هَلْ يَهْلِكُ إِلَّا الْقَوْمَ الظَّالِمُونَ ﴿٤٧﴾

48. Rasuulada waxaan u Dirraa inay Bishaareeyaan oo Digaan, Ciddii Rumaysa Xaqa oo Wanaajiya (Camalka) Cabsi iyo Murug midna ma Saarro.

وَمَا تُرْسِلُ الْمُرْسَلِينَ إِلَّا مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ فَمَنْ
ءَامَنَ وَأَصْلَحَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٤٨﴾

49. Kuwa Beeniyey Aayaadkanaga waxaa Taaban Cadaab Faasiqnimadooda Darteed.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِنَا يمسُهُمُ الْعَذَابُ بِمَا كَانُوا
يَفْسُقُونَ ﴿٤٩﴾

Hadduu Eebe ka Qaado Ruuxa Nicmada, Maqalka ama Aragga ama Qalbiga Daboolo Cidaan Eebe ahayn oo u Keeni karta ma jirto, Eebana Xaquu soo Cel-Celiyaa si Loogu Waano Qaato, Gaaladuse way ka Jeedsan Xaqa, wax Cadaabka Eebe Celin Karana ma jiro ama Kado ha ku yimaaddo ama si Caddaanaba, Daalimiinta Umbaana la Halaagi, Rasuuladana waa Bishaareeyayaal Diga, Ciddii Xaqa Rumaysa oo Camalka Wanaajisana Cabsi iyo Murug midna ma Aragto, kuwa Beeniya Aayaadka Eebana waxaa Taaban Cadaab Faasiqnimadooda Darteed, Ujeeddaduna waxaa Weeye in Eebe Cid la Wadaagta Awoodda ayna jirin, Xaqana uu Caddeeyey, Nabiyana Diray, Xaq - Beeniyana uu Halaagi. Al-Ancaam (46-49).

50. Waxaad Dhahdaa Ma Dhahayo waxaa Agtayda ah Khasnadaha Eebe, waxa Maqanna ma Ogi, mana Dhahayo waxaan ahay Malag, waxaan uun Raaci wixii lay waxyoodo, waxaad dhahdaa ma egyhiin Indhoole iyo Arke, Miyeydaan Fikirayn.

قُلْ لَا أَقُولُ لَكُمْ عِنْدِي خَزَائِنُ اللَّهِ وَلَا أَعْلَمُ
الْغَيْبَ وَلَا أَقُولُ لَكُمْ إِنْ مَلَكَ إِيَّائِي أَنْتَبِعُ إِلَّا مَا
يُوحَىٰ إِلَيَّ قُلْ هَلْ يَسْتَوِي الْأَعْمَىٰ وَالْبَصِيرُ
أَفَلَا تَتَفَكَّرُونَ ﴿٥٠﴾

51. Ugu dig Quraanka kuwa ka Cabsan in loo soo kulmiyo Eebahood iyagoon lahayn Sokaydiis ku u dhow oo jecel iyo Shafeece Midna, inay Dhawrsadaan Darteed.

وَأَنْذِرْ بِهِ الَّذِينَ يَخَافُونَ أَنْ يُحْسَرُوا إِلَىٰ رَبِّهِمْ
لَيْسَ لَهُمْ مِنْ دُونِهِ وَلِيٌّ وَلَا شَفِيعٌ لَعَلَّهُمْ
يَتَّقُونَ ﴿٥١﴾

52. Hana Eryin kuwa Baryi Eebahood aroor iyo Galabba iyagoo dooni Wajigiisa, waxba kaama saarra Xisaabtooda iyana Xisaabtaada Waxba kama Saarra, oo haddaad erididna aad ka mid noqotid daalimiinta.

وَلَا تَطْرُدِ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْعَدْوَىٰ وَالْعَشَىٰ
يُرِيدُونَ وَجْهَهُ، مَا لَكُم مِّنْ حِسَابِهِمْ مِنْ شَيْءٍ
وَمَا مِنْ حِسَابِكُمْ عَلَيْهِمْ مِنْ شَيْءٍ فَتَطْرُدَهُمْ
فَتَكُونُوا مِنَ الظَّالِمِينَ ﴿٥٢﴾

Wuxuu Eebe faray Nabiga inuu u Sheego Dadka inuusan Hananin Khasnadda Eebe, waxa maqanna Ogayn, Malagna ahayn, ee uu Raaci uun Xaqa loo Waxyooday, mana Sinna Indhoole iyo wax arke, Waana in Wax la fiiriyo si Xaqa loo Rumeeyo, Quraanka yuuna Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) ugu Digi Jiray dadka ka Cabsan in Alle loo soo kulmiyo iyagoon heleyn gargaare iyo Shafeece isaga ka soo Hadhay, bal inay Dhawrsadaan, wuxuuna Eebe ka Reebay Nabiga inuu Eryo kuwa Eebe Caabudi had iyo Jeer iyagoo Dooni Wajigiisa, ILLeen Xisaabtooda Ma saarra Korkiisee, Xisaabtiisana ma Saarra korkoodee, Hadduu Foggeeyana uu Noqon mid Xaqa ka Leexday, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waa ka Fogyahay inuu Foggeeyo kuwa xaqa Rumeeyey ee waxaa lagu Quusin Gaalada Doonaysa inay isku Dayaan inay kala foggeeyaan Nabiga iyo Mu'miniinta, Aayaduna waxay soo Degtay Mar Nabiga ay la Joogeen Suhayl, Bilaal iyo Cammaar oo Gaaladii Qureesheed ku Dhaheen Nabiga ma kuwanaa Eebe naga Doortay, iska Eri aan ku Raacnee. Al-Ancaam (50-52).

53. Saasaan isugu Imtixaanay (Dadka) Qaarkood Qaarka kale inay Dhahaan ma kuwanaa Eebe ku Manaystay (Is-laamka) Dhexdannada, Miyuusan Eebe ahayn kan og kuwa ku Mahdiya.

وَكَذَٰلِكَ فَتَنَّا بَعْضَهُم بِبَعْضٍ لِّيَقُولُوا أَهَٰؤُلَاءِ
مِنَ اللَّهِ عَلَيْهِمْ مِنْ بَيْنِنَا أَلَيْسَ اللَّهُ بِأَعْلَمَ
بِالشَّاكِرِينَ ﴿٥٣﴾

54. Markay kuu Yimaadaan kuwa Rumeeyey Aayaadkanaga waxaad Dhahdaa salaamu calaykum (waad salaaman tihiin), wuxuu Eebe Isasaaray Naxariis, oo ah Ciddii idinka mid ah oo Fasha Xumaan isagoo ka Jaahil ah oo Toobad keena oo wanaajiya, Eebaa u Dhaafi una Naxariisan.

وَإِذَا جَاءَكَ الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِآيَاتِنَا فَقُلْ سَلَّمْتُ
عَلَيْكُمْ كَمَا سَلَّمَ عَلَيَّ عَلَىٰ نَفْسِي الرَّحْمَةُ أَنَّهُ
مَنْ عَمِلَ مِنْكُمْ سُوءًا بِجَهَالَةٍ ثُمَّ تَابَ مِنْ
بَعْدِهِ وَأَصْلَحَ فَأَنَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥٤﴾

55. Saasaanu u Kala Bixinnaa Aayaadka si uu u Caddaado Jidka Dambii-layaasha.

وَكَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ لَّيْسَ لَهُمْ
الْمَعْرِيفَةُ ﴿٥٥﴾

Adduunku waa Guri Imtixaan, Dadkana waa laysku Imtixaanay, siday Gaaladii Qureesheed u Xaqiri Jireen, ma Kuwanaa Eebe naga Doortay oo Hanuuniyey, Eebaase og Cidda ku Mahdisa, wuxuuna Eebe

Faray Nabiga in Hadday u Yimaadaan kuwa Xaqa Rumeeyey uu Salaamo, Soona Dhaweeyo, wuxuuna u Yaabohay Ciddii Gafta isagoon Ogayn oo Haddana Toobad keenta Wanaaggana Fasha in Eebe u Naxariisan una Dambi Dhaafi, Eebana Xaqa wuu qeexay si uu u Caddaado Jidka Dambillaayashu, Gaalada iyo Kuwaan wax kasayn had iyo Jeer waxay Qiimo Dheeraada Siiyaan Xoolaha, Madaxtinimada iyo Caruurta, iyagoo qiyaasi in Cidda wax haysata ay Mudantahay Hanuunka, Tasaasna waa Fikrad Xun oo Khalada, Cidda Xoolaha Haysata kama sarreeyo kan Saboolka ah, waxaase lagu kala Sarreeyaa Akhlaaqda, Wanaag falka, Eebe ka Yaabidda iyo Raacidda Xaqa. Al-Ancaam (53-55).

56. Waxaad Dhahdaa waxaa layga Reebay inaan Caabudo waxaad Caabudaysaan oo Eebe ka soo Hadhay, waxaad Dhahdaa Raaci maayo hawadiinna oon Dhumo markaas, kana mid noqon waayo kuwa hanuunsan.

قُلْ إِنِّي نُهِيتُ أَنْ أَعْبُدَ الَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ
قُلْ لَا اتَّبِعُ أَهْوَاءَكُمْ قَدْ ضَلَّكُمُ إِذًا وَمَا أَنَا مِنَ
الْمُهْتَدِينَ ﴿٥٦﴾

57. Waxaad Dhahdaa waxaan ku Sugnahay Xujo Eebahay waadna Beeniseen Xaqaas, agtayda ma aha waxaad Dadajisanaysaan, Xukunkana Eebaa iska leh, Xaquuna Xukumi, isagaana u kheyir badan kuwa wax kala xukmiya.

قُلْ إِنِّي عَلَىٰ بَيِّنَةٍ مِنْ رَبِّي وَكَذَّبْتُمْ بِهِ مَا عَزَدِي
مَا تَسْتَعْجِلُونَ بِهِ إِنَّ الْخُكُومَ إِلَّا لِلَّهِ يَقُضُّ
الْحَقُّ وَهُوَ خَيْرُ الْقَاضِينَ ﴿٥٧﴾

58. Waxaad Dhahdaa hadduu Yahay agtayda waxaad Dedejisanaysaan (Ci-qabta) waxaa la kala Xukumi lahaa Dhexdeenna, Eebana waa Ogyahay Daalimiinta.

قُلْ لَوْ أَنَّ عِنْدِي مَا تَسْتَعْجِلُونَ بِهِ لَقُضِيَ الْأَمْرُ بَيْنِي
وَبَيْنَكُمْ وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِالظَّالِمِينَ ﴿٥٨﴾

59. Eebe Agtiisa waxaa ah Furaha waxa maqan, wax og oon isaga ahayna ma jiro, wuxuuna Ogyahay waxa Barriga iyo Badda ku Sugan, wixii Caleena oo Dhacdana wuu Ogyahay, Xabbad Masagga ah oo Mugdiga Dhulka ku Sugan iyo wixii Qoyan ama engagan waxay ku Suganyihiin Kitaab Cad.

* وَعِنْدَهُ مَفَاتِيحُ الْغَيْبِ لَا يَعْلَمُهَا إِلَّا هُوَ
وَيَعْلَمُ مَا فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ وَمَا تَسْفُطُ مِنْ رِزْقِهِ
إِلَّا يَعْلَمُهَا وَلَا تَحِيطُ فِي ظُلُمَاتِ الْأَرْضِ وَلَا رَطْبٍ
وَلَا يَابِسٍ إِلَّا فِي كِتَابٍ مُبِينٍ ﴿٥٩﴾

Eebaa Mudan Cibaadada, Gaalada Hawadeeda Ciddii Raacdana way Dhumi, Nabiguna wuxuu ku Suganyahay Xujo Cad oo Eebe; Gaaladuna way Beeniyeen Xaqii, Nabigana waxaa Saaran Gaadhsiin, Eebaana Xaqa Kala Xukuma, Ciqaabna waxaa hanta Eebe, Isagaana og Daalimiinta, Isagaana og waxa ku Maqan, Barri iyo Badba. Al-Ancaam (56-59).

60. Eebe waa kan idin Oofsada Habeenkii ogna waxaad Fashaan Maalintii, Markaasna idin soo Bixiya in la Xukumo Ajal Magacaaban darteed,

وَهُوَ الَّذِي يَتَوَفَّاكُم بِأَنبَاءِ الْوَعْدِ مَا جَرَحْتُم
بِالنَّهَارِ ثُمَّ يَبْعَثْكُمْ فِيهِ لِقَضَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى
ثُمَّ إِلَيْهِ مَرْجِعُكُمْ ثُمَّ يُنْفِخُ بِكُمْ بِمَا كُنتُمْ

Xaggiisaana laydiin Celin, markaasuu idiinka warrami waxaad Falaysaan.

تَعْمَلُونَ ﴿٦٠﴾

61. Eebe waa kan ka Sarreeya Addoomadiisa, wuxuuna idiin soo Diraa malaa'ig idin ilaalisa, Waxaad samaynaysaanna qora, markuu u Yimaaddo Midkiin mawdku waxaa Oofsata «Disha» Malaa'igtanada, mana Gabood Falaan.

وَهُوَ الْقَاهِرُ قَوِّقَ عِبَادِهِ وَرَسُولَ عَلَيْهِ كَرَحْفَظَةً
حَقِّقًا إِذَا جَاءَ أَحَدَكُمُ الْمَوْتُ تَوَفَّقْتُهُ رُسُلَنَا وَهُمْ
لَا يُفَرِّطُونَ ﴿٦١﴾

62. Markaasaa loo Celin Dadka Xagga Sayidkooda Xaqa ah, isagaana leh Xukunka Dedejiyana Xisaabta.

ثُمَّ رُدُّوْا إِلَى اللَّهِ مَوْلَاهُمُ الْحَقِّ أَلَا لَهُ الْخُكُومُ وَهُوَ
أَسْرَعُ الْحَاسِبِينَ ﴿٦٢﴾

Eebe waa kan Dadka Oofsada Habeenkii Markay Hurdaan, oga waxay Fali Maalintii, Muddo Magacaabanna Sameeyey, Xaggiisaana loo Noqon, ugana warrami waxay Faleen, waana kan wax walba u Khushuucan oo ka Sarreeya, Malaa'ig Nafta Qaaddana u soo Diraa Dadka oon Gabood Falayn, Dadkuna Xaggiisa u Noqon, Sayid Xaq ahna ah, Xukunkana iska leh, Xisaabtiisuna Degdegayso. waxaa Sugnaatay in Marka la dhiman Malaa'igtu u Bishaarayn Nafta Fiican, Canaananna midda Xun, Saas Darteed waa in loo diyaargarooobo, Eebana la warsado xaq ku Sugnaan iyo Wanaag. Al-Ancaam (60-62).

63. Waxaad Dhahdaa Yaa idinka koriya Mugdiga Barriga iyo Badda ood u Baridaan Isdullayn iyo Qarsoodi, Idinkoo dhihi Hadduu naga koriyo Tan waxaan ka mid Noqonaynaa kuwa Mahadiya.

قُلْ مَنْ يَجْعَلُ لَكُمْ الْبَرَّ وَالْبَحْرَ تَدْعُونَهُمْ
تَضَرُّعًا وَخُفْيَةً لَئِنْ أَجَبْنَا مِنْ هَذِهِ لَنَكُونَنَّ مِنَ
الشَّاكِرِينَ ﴿٦٣﴾

64. Waxaad Dhahdaa Eebaa idinka Koriya Taas iyo Shiddo Kasta, Markaasaad u Shariigeeshaan.

قُلْ اللَّهُ يَجْعَلُ كَرِمَتَهَا وَمِنْ كُلِّ دَرَبٍ مَنَّا نَشْرُكُونَ ﴿٦٤﴾

65. Waxaad Dhahdaa Eebe waa kan kara inuu idinku soo Daayo Cadaab Korkiinna ama Lugihiinna Hoostooda ama idin qaso (idinka yeelo) Kooxo uu Dhadhansiiyo Qaarkood qaarka kale Dhibkiisa, bal day Sidaan ugu Caddaynayno Aayaadka, bal inay Kasaan.

قُلْ هُوَ الْقَادِرُ عَلَى أَنْ يَجْعَلَ عَلَيْكُمْ عَذَابًا أَلِيمًا وَيُتَوَفَّاكُمْ فَأُولَئِكَ
سُئِلْتُمْ أَتَجِدُونَ أَوْلِيَاءَ يَدِينُكُمْ بِأَسْمَائِهِمْ أَمْ لَهُمْ
بِأَسْمَائِهِمْ أَنْظَرُ كَيْفَ نَصْرُفُ الْأَوْلِيَاءِ لَعَلَّهُمْ
يَفْقَهُونَ ﴿٦٥﴾

Eebaa Dadka ka Koriya Mugdiga Barriga iyo Baddaba, oyna Baryaan Dadku inuu ka Koriyo Dhibka, Isagaana ka Koriya Shiddo oo Dhan, hadana ay u Shariigeeeli, karana inuu Cadaab Korka ama Hoosta kaga soo Daayo, ama Kooxo is Laaya ka Yeelo, Xaqana Caddeeya si wax loo Fahmo, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Waxaan warsaday Eebahay Saddex: Waxaan warsaday inuusan Umaddayda ku Halaagin Maanshayn, wuuna i siiyey, waxaana Warsaday

inuusan Umaddayda ku Halaagin Abaar, wuuna i siiyey, waxaana Warsaday inuusan Dhexdooda Yeelin Dagaal wuuna ii diiday. Waxaa wariyey Muslim. Al-Ancaam (63-65).

66. Waxaa Beeniyey (Quraanka) Qoomkaagii Isagoo Xaq ah, waxaad Dhahdaa kama ahi Korkiinna Wakiil (ILaaliye).

وَكَذَّبَ بِهِ قَوْمُكَ وَهُوَ الْحَقُّ قُلْ لَسْتُ عَلَيْكُمْ بِوَكِيلٍ ﴿٦٦﴾

67. War kasta Meel uu ku Sugnaado yuu leeyahay Waadna Ogaandoontaan.

لِكُلِّ نَبَأٍ مُّسْتَقَرٌّ وَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٦٧﴾

68. Markaad Aragtaan kuwa dhumban Aayaadkannaga, isaga Jeedso intay ka Dhumbadaan Sheeko kale, hadduu ku Halmaansiiyo Shaydaanna ha la Fadhiyin Xusuusta ka Dib Daalimiinta.

وَإِذَا رَأَيْتَ الَّذِينَ يَخُوضُونَ فِي بَيْنِنَا فَأَعْرَضْ عَنْهُمْ حَتَّى يَخُوضُوا فِي حَدِيثٍ غَيْرِهِ وَإِمَّا يُنْسِيَنَّكَ الشَّيْطَانُ فَلَا تَقْعُدْ بَعْدَ الذِّكْرِى مَعَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٦٨﴾

69. Kuwa Dhawrsoonna Xisaabtooda waxba kama Saarra, Laakiin waa Waano, bal inay Dhawrsadaan.

وَمَا عَلَى الَّذِينَ يَتَّقُونَ مِنْ حِسَابِهِمْ مِنْ شَيْءٍ وَلَكِنْ ذَكَرُوا لَعْنَهُمْ يَتَّقُونَ ﴿٦٩﴾

Quraanka waxaa Beeniyey Gaaladii Makaad isagoo Xaq ah, Nabiguse ILaaliye Qasbi ma ahayn, ILLeen wax kastaba waqtiuu Leeyahay la Ogaandoonee, waa in Marka lala Kulmo Cid wax ka Sheegi Quraanka iyo Xaqa aan lala fadhiisan intay iska Dayso Xaalkaas, hadduu Shaydaan ku Halmaansiiyana waa inaan lala sii Fadhiyin Daalimiinta, Ciddii Dhuntana Xil Kama Saarra Cidda Dhawrsoon, Waxaase laga Rabaa waano iyo wax u Sheegid uun.

Aayaduhuna waxay Caddayn in xaqu Muuqdo, Ciddii diidda oo Ceebeyn xaqana aan lala Fadhiisan ee laga Fogaado, wax Dhib ahna Kaama Saarra Ciddii Diidda Xaqa, Haddaad Dhawrsato ood Eebe ka Yaabtid. Al-Ancaam (66-69).

70. Iskaga tag Kuwa ka Yeeshay Diintooda Ciyaar iyo Madaddaalo kuna Kadsoomay Nolosha Dhaw Xusuusina intaan laga Abaalmarinin (Loo Xabisin) Nafi waxay kasbatay Iyadoon Lahayn Eebe ka sokow Wali «Sokeeye jecel» iyo Shafeece midna, Hadday isku Furato Furasho oo Dhanna lagama Qaado, Kuwaasu waa kuwa loo Dhii-bay (Halaag) waxay kasbadeen Dartiis, waxayna Mudan Cabbid Kulul iyo Cadaab daran, Gaalnimadooda Dar-teed.

وَدَّرَ الَّذِينَ اتَّخَذُوا دِينَهُمْ لَعِبًا وَلَهُمْ وَعَدَّتْهُمْ الْحَيَوةُ الدُّنْيَا وَذَكَرَ بِهِمْ أَنْ يُسْئَلُ نَفْسٌ بِمَا كَسَبَتْ لَيْسَ لَهَا مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلِيٌّ وَلَا شَفِيعٌ وَإِنْ تَعَدَلَ كُلُّ دَلِيلٍ لَأُبْرِئَنَّ مِنْهَا أُولَئِكَ الَّذِينَ أَنْبِئُوا بِمَا كَسَبُوا لَهُمْ شَرَابٌ مِنْ حَمِيمٍ وَعَذَابٌ أَلِيمٌ بِمَا كَانُوا يَكْفُرُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxaad Dhahdaa ma waxaan Caabudaynaa Eebe ka sokow waxaan na Anfacyan nana Dhibayn oo Dib naloogu

قُلْ أَدْعُوهُمْ إِلَى دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَنْفَعُنَا وَلَا يَضُرُّنَا وَنُرَدُّ عَلَى أَعْقَابِنَا بَعْدَ إِذْ هَدَيْتَنَا اللَّهُ كَالَّذِي

Celin (Gaalnimo) inta Eebe na Hanuuniyey ka Dib, Sida kan ay ku Wareerisay (Dhumisay) Shayaadiintu Dhulka Isagoo leh Saaxiibbo ugu Yeedhi Hanuunka oo ku Leh noo Kaalay, waxaad Dhahdaa Hanuunka Eebe unbaa Hanuun ah, waxaana Nala Faray inaan u Hogaansanno Eebaha Caalamka.

أَسْمَهُوَتُهُ السَّيْطَانُ فِي الْأَرْضِ حَيْرَانٌ لَهُ
أَصْحَابٌ يَدْعُوْنَهُ وَإِلَى الْهُدَى آتَيْنَا قُلَّ إِنَّ
هُدَى اللَّهِ هُوَ الْهُدَى وَأَمْرًا نَالِ السَّلَامِ لِرَبِّ
الْعَالَمِينَ ﴿٧١﴾

Ciddii Xaqa ka Jeedsata oo Diintiisa ka Yeesha Ciyaar oo Adduunyadu Khaladdo waa in layskaga Tago, oon lagu Waqti Seegin, mar haddii loo Caddeeyey Xaqa iyo in Naf walba loo Xidhi Camalkaada iyadoon Gargaare iyo Shafeece helayn, wax is furasha ahna aan laga aqbalayn, waana kuwa loo Ciqaabi Camalkoodii Xumaa Dartiis, Mudanna Cabbid Kulul iyo Cadaab daran, Gaalnimadoodii Xumayd Darteed, Saas darteed waa in Eebe Kaliya la Caabudo, lagana Leexdo Waddada Shaydaanka Dadka Baadiyeyya, oo Hanuunka ka Leexiya. Al-Ancaam (70-71).

72. Oogana Salaadda kana Dhawrsada Eebe waa kan Xaggiisa laydiin soo Kulmine.

وَأَنْ أَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُواهُ وَهُوَ الَّذِي إِلَيْهِ
تُحْشَرُونَ ﴿٧٢﴾

73. Allana waa ka ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Xaq, Maalinta uu Dhihi Ahow wuu ahaan (waxaasu), Hadalkiisu waa Xaq, wuxuuna Leeyahay Xukunk Maalinta la Afuufi Suurka, waana Ogyahay wax Maqan (la arkayn) iyo waxa Joogaba, waana Falsame Xeel Dheer.

وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ يَوْمَ
يَقُولُ كُنْ فَيَكُونُ قَوْلُهُ الْحَقُّ وَلَهُ الْمُلْكُ يَوْمَ
يُنْفَخُ فِي الصُّورِ عَلَيْهِ الْعِجَابُ وَاللَّشَّادَةُ
هُوَ الْحَكِيمُ الْخَبِيرُ ﴿٧٣﴾

Waxaa la faray inay Hogaansamaan Oogaanna Salaadda, kana Dhawrsadaan Eebe, ILLeen isagaa Xaggiisa loo Kulmine, Eebana waa kan Samooyinka iyo Dhulka Xaq u Abuuray, Wuxuu Amraana Isla markaasba ahaan, Hadalkiisuna Xaq Yahay, Xukunkana Iska leeyahay Maalinta Suurka Qiyaame la Afuufi, Ogyahayna wax kasta, Falna Sanyahay Ogaanshihiisuna Xeel Dheeryahay. Saas darteed waa in loo diyaargarooobaa Maalintaas wayn ee lays Abaal marin, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Israa'fiil wuxuu Afka Saaray Suurka Wajigiisana wuu Leexiyey Isagoo Sugi marka la Fari inuu Afuufo. Waxaa Wariyey (Imaam Muslim). Al-Ancaam (72-73).

74. Ka Warran markuu ku Yidhi (Nabi) Ibraahim Aabihiis Aazara ma waxaad ka Yeelan Sanamyo Ilaahyo, waxaan kugu Arkaa adiga iyo Qoomkaagaba Baadi Cad.

﴿٧٤﴾ وَإِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ لِأَبِيهِ إِذْ رَأَى أَنَّهُ أَخَذَ أُصْنَانًا
مِّنَ الْمَسَاءِ إِلَىٰ آرَائِكَ وَقَوْمًا فِي صَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٧٤﴾

75. Saasaan u Tusinnay Ibraahim Xukunka Samooyinka iyo Dhulka si uu uga

وَكَذَلِكَ نُرَىٰ إِبْرَاهِيمَ مَلَكُوتَ السَّمَوَاتِ

Mid Noqdo kuwa Yaqiiniya (Xaqa).

وَالْأَرْضِ وَلِيكُونَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٧٥﴾

76. Markuu ku Madoobaaday Habeen-ku wuxuu Arkay Xiddig Wuxuuna Yidhi kani waa rabbigay, markuu Dhacay wuxuu Yidhi ma Jecli kuwa Dhaca.

فَلَمَّا جَزَّ عَلَيْهِ إِلْيَلٌ رَّآهُ أَكْرَبًا قَالَ هَذَا رَبِّي فَلَمَّا أَقْبَلَ قَالَ لَا أُحِبُّ الْإِفْلَاحَ ﴿٧٦﴾

77. Markuu Arkay Dayaxa oo soo - Muuqda wuxuu yidhi kani waa rabbigay, markuu Dhacay wuxuu Yidhi Hadduusan I hanuunin Eebahay waxaan ka mid Noqon kuwa Dhuma.

فَلَمَّا رَأَى الْقَمَرَ بَازِعًا قَالَ هَذَا رَبِّي فَلَمَّا أَقْبَلَ قَالَ لَيْسَ يُرِيدُنِي رَبِّي لِأَكُونُ مِنَ الْقَوْمِ الضَّالِّينَ ﴿٧٧﴾

78. Markuu Arkay Qorraxda oo soo Muuqata wuxuu Yidhi kani waa rabbigay, kanaa wayne, Markay Dhacday wuxuu Yidhi Qoomkayow Beri Baan ka ahay waxaad la wadaajinaysaan (Eebe).

فَلَمَّا رَأَى الشَّمْسَ بَازِعَةً قَالَ هَذَا رَبِّي هَذَا أَكْبَرُ فَلَمَّا أَفَلَتْ قَالَ يُرِيدُنِي إِتْيَانًا مِّنَ الشَّرِكَاتِ ﴿٧٨﴾

79. Anugu waxaan u Jeediyeey Wajigayga Eebaha Abuuray Samooyinka iyo Dhulka anoo Toosan oon ka mid ahayn Gaalada.

إِنِّي وَجَّهْتُ وَجْهِيَ لِلَّذِي فَطَرَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ حَنِيفًا وَمَا أَنَا مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿٧٩﴾

Nabi Ibraahim wuxuu u Digay Aabihiis iyo Qoomkiisiiba, wuxuuna ka Reebay inay Caabudaan Sanamyo, ILLeen Eebaa Nabi Ibraahim Tusiyeey Aayaadkiisa si uu uga mid Noqdo kuwa xaqa Yaqiinsan, Wuxuuna Qoomkiisii u Sheegay in Xiddigaha, Dayaxa iyo Qorraxdaba ayan Mudnayn in la Caabudo, ee Caabudidda Xaqa ah Eebe kali ah Mudanyahay, wuxuuna u Caddeeyey Qoomkaas inuu Beri ka yahay waxay Caabudi oo Eebe ka soo Hadhay, uuna u Jeedsaday xagga Eebabaha Xaqa ah, ee Abuuray Cirka iyo Dhulka, Taasina waxay ina Tusin ku Sugnaanta Xaqa iyo in Qaraabanimadu tahay Islaamnimda iyo Diinta, waxa ka soo hadhayna usaan wax ahayn.

Nabi Ibraahimna wuxuu uga Dan lahaa Xiddigaha, Dayaxa iyo Qorraxda inuu tusiyo Gaalada in waxay Caabudi usaan wax ka jirin, maxaa yeelay waa wax Doorsoomi oo Dhici oo soo Bixi, mase ahayn Nabi Ibraahim mid wax Shakiyey. Al-Ancaam (74-79).

80. Way La doodeen Nabi Ibraahim Qoomkiisii, Wuxuuna yidhi ma waxaad igula Doodaysaan Eebe, Isagoo I hanuuniyey, oonan ka Cabsanayn waxaad la Wadaajinaysaan, in Eebahay wax doono Mooyee, Eebahay waa u Waasac (Awoodleeyahay) wax kasto xag Ogaansho, miyeydaan Xusuusanayn (wax).

وَرَحَابَهُ قَوْمُهُ قَالَ اتَّخَذْتُنِي فِي اللَّهِ وَقَدْ هَدَّنِي وَلَا أَخَافُ مَا تُشْرِكُونَ بِهِ إِلَّا أَن يَنْسَاءَ رَبِّي سَيْفًا وَيَسِعَ رَبِّي كُلَّ شَيْءٍ عِلْمًا أَفَلَا تَتَذَكَّرُونَ ﴿٨٠﴾

81. Sideen uga Cabsan waxaad la Wadaajiseen, idinkuna aydaan ka Cab-

وَكَيْفَ أَخَافُ مَا أَشْرَكْتُمُ وَلَا تَخَافُونَ أَنَّكُمْ

sanayn inaad la Wadaajiseen Eebe wuxuusan u soo Dejinin Xujo, ee Labada Kooxood (Muslimka iyo Gaalada) koodee mudan Nabdagalyo Haddaad wax Ogtihiin.

أَشْرَكْتُمْ بِاللَّهِ مَا لَمْ يَنْزِلْ بِهِ عَلَيْكُمْ سُلْطَانًا
فَأَنَّ الْفَرِيقَيْنِ أَحَقُّ بِالْأَمْنِ إِنْ كُنْتُمْ
تَعْلَمُونَ ﴿٨١﴾

82. Kuwa Xaqa Rumeeyey oon ku Dheehin Iimaankooda Dulmi (Gaalnimo) kuwaasaa Nabadgalyo u Sugnaatay Hanuunsanna.

الَّذِينَ آمَنُوا وَلَمْ يَلْبِسُوا إِيمَانَهُمْ بِظُلْمٍ أُولَئِكَ لَهُمُ
الْأَمْنُ وَهُمْ مُهْتَدُونَ ﴿٨٢﴾

83. Taasina waa Xujadanadii aan Ibraahim ka siinnay Qoomkiisa, waxaan koryeellaa Darajaadka Ciddaan Doonno, Eebahaana waa Falsame Oge ah.

وَتِلْكَ حُجَّتُنَا آتَيْنَاهَا إِبْرَاهِيمَ عَلَى قَوْمِهِ نَرْفَعُ
دَرَجَاتٍ مَن نَّشَاءُ إِنَّ رَبَّكَ حَكِيمٌ عَلِيمٌ ﴿٨٣﴾

Aayadahan wuxuu Eebe ku Sheegay inay ku Doodeen Nabi Ibraahim iyo Qoomkiisii Xaalka Eebe, una Caddeeyey in Eebe Hanuuniyey uuna ka Cabsanayn waxay la Wadaajiyeen Eebe, Ilaahayna ogyahay wax walba, wuxuuna ku Yidhi Sideen uga Cabsan waxaad la wadaajiseen Eebe Idinkuna aydaan ka Cabsanayn inaad Eebe la wadaajiseen wuxuusan Xujo idiinku soo Dejinin, Yaase Mudan Nabadgalyo Labadeenna Qolo, haddaad wax Garanaysaan, waxaa Mudan Nabadgalyo oo Hanuunsan kuwa Rumeeyey Xaqa oon ku Dheehin Imaankooda Gaalnimo, Waana Taas Xujaduu Eebe siiyey Nabi Ibraahim, wuxuuna koryeellaa Darajaadka Cidduu doono waana Falsame oge ah, Taasina waxay Tusin in Cidda Xaqa ku Socota mudan yahay Nabadgalyo iyo Hanuun iyo inuusan ka Cabsan waxay ku Cabsi Galin. Al-Ancaam (80-83).

84. (Ibraahim) Waxaan siinnay Isxaaq iyo Yacquub, Dhammaanna waan Hanuunnay, Nabi Nuuxna waan Hanuunnay waqti Hore, waxaana ka mid ah Faraciisii Nabi Daawuud, Sulaymaan, Ayuub, Yuusuf, Muuse iyo Haaruun, Saasaana ku Abaal marinnaa Samofalayaasha.

وَوَهَبْنَا لَهُ إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ كُلًّا هَدَيْنَا وَنُوحًا
هَدَيْنَا مِن قَبْلُ وَمِن ذُرِّيَّتِهِ دَاوُدَ وَسُلَيْمَانَ
وَأَيُّوبَ وَيُوسُفَ وَمُوسَى وَهَارُونَ وَكَذَلِكَ
نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ ﴿٨٤﴾

85. Iyo Zakariye, Yaxye, Ciise, Ilyaas, Dhammaanna waxay ahaayeen kuwo Suubban.

وَزَكَرِيَّا وَيَحْيَى وَعِيسَى وَإِبْرَاهِيمَ كُلٌّ مِّنَ
الصَّالِحِينَ ﴿٨٥﴾

86. Iyo Ismaaciil, Alyasac, Yuunus, iyo Luud, Dhammaanna waxaan ka Fadilnay Caalamka.

وَإِسْمَاعِيلَ وَالْيَسَعَ وَيُوسُفَ وَلُوطًا وَكَذَلِكَ
عَلَى الْعَالَمِينَ ﴿٨٦﴾

87. Iyo Aabayaalkood iyo Faracoodii iyo Walaalahood waana Doorannay waana ku Hanuunnay Jidka Toosan.

وَمِن آبَائِهِمْ وَذُرِّيَّاتِهِمْ وَإِخْوَانِهِمْ وَاجْتَبَيْنَاهُمْ
وَهَدَيْنَاهُمْ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٨٧﴾

88. Kaasi waa Hanuunkii Eebe wuxuuna ku Hanuuniyaa Cidduu Doono oo ka mid ah Addoomadiisa, hadday wax la wadaajiyaan Eebana waxaa ka Buri waxay Fali Jireen.

ذَلِكَ هُدَى اللَّهِ يَهْدِي بِهِ مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ
وَأَنْتُمْ كُرُوا لِحَيْطِ عَنْهُمْ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٨٨﴾

89. Kuwaasu waa kuwaan siinnay Kitaabka, Xukunka iyo Nabinimada, Hadday ka Gaaloobaanna Kuwaasu «Gaalada Makaad» waxaan u wakaalanay Qoom aan ka Gaaloobayn, (Muslimiinta).

أُولَئِكَ الَّذِينَ اتَّخَذْتُمْ أَلْقَابًا وَلَكُمْ
وَالسُّجُودَ فَإِنْ يُكْفِرْ بِهَا هَتُولًا فَقَدْ وَكَّعْنَا بِهَا
قَوْمًا لَيْسُوا بِهَا بِكَافِرِينَ ﴿٨٩﴾

90. Kuwaas (Nabiyada) weeye kuwa Eebe hanuuniyey ee Hanuunkooda ku dayo, waxaadna Dhahdaa idin ma warsanaayo Ujuuro, ee waa uun waanada caalamka.

أُولَئِكَ الَّذِينَ هَدَى اللَّهُ فَبِهِدَّتْهُمْ آفَتُهُ قُلْ لَا
أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ
لِلْعَالَمِينَ ﴿٩٠﴾

Halkan wuxuu Eebe ku Sheegi Nicmaduu siiyey Nabiyada Gaar ahaan inuu siiyey Nabi Ibraahim Ilmo Isagoo wayn, Jidka Toosanna ku Hanuuniyey Dhammaan Nabiyada Doortayna Eebe, Eebana uga Digay inay ka Leexdaan Jidka Toosan Haddii kale waxaa Buri Camalkoodii, waxaana Eebe siiyey Kutubo, Xukun iyo Nabinimo. Hadday Gaaladu Xaqa Diidaanna wuxuu Eebe Leeyahay Dadaan marna ka Gaaloobaynin, Waana kuwaa Nabiyaduu Eebe Hanuuniyey ee ha lagu daydo marba hadduu Eebe Faray Arrintaas, wax Ujoooro ahna Nabigu kama Warsanayo Xaqa Gaadhsiintiisa, ee waa uun waanada Caalamka. Al-Ancaam (84-90).

91. Mayna Waynaynin Eebe Waynaan-tiisa Xaqa ah, Markay Dheheen Kuma soo Dejin Eebe Dad waxba, waxaad Dhahdaa yaa soo Dejiyey Kitaabkii uu la yimid Nabi Muuse Iagoo iftiin Hanuunna u ah Dadka ood Yeelayseen warqado aad Muujisaan, oodna qariisaan wax Badan, waxaana laydin Baray waxaydaan Aqoonin idinka iyo Aabayaalkiin, waxaad Dhahdaa Eebaa (soo Dejiyey), markaas isaga tag Dhumbashadooda iyagoo Ciyaari.

وَمَا قَدَرُوا اللَّهَ حَقَّ قَدْرِهِ إِذْ قَالُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ عَلَى بَشَرٍ
مِثْلَ شَيْءٍ قُلْ مَنْ أَنْزَلَ الْكِتَابَ الَّذِي جَاءَ بِهِ
مُوسَى نُورًا وَهُدًى لِّلنَّاسِ لِيَجْعَلُوهُ قُرْآنًا
يُبَدِّلُونَهَا وَيُخْفُونَ كَثِيرًا وَعَلَّمَهُ مَا لَمْ تَلْمَعُوا أَنَّهُ
وَلَا آتَاءُوكُمْ قُلْ اللَّهُ تَرَدَّدَهُمْ فِي حَوْضِهِمْ
يَلْعَبُونَ ﴿٩١﴾

92. Kanna waa Kitaab aan soo Dejinay oo Barakaysan, oo Rumayn wixii ka Horreeyey iyo inaad ugu Digtid Maka iyo Dhinacyadeeda, kuwa Rumayn

وَهَذَا كِتَابٌ أَنْزَلْنَاهُ مُبَارَكٌ مُّصَدِّقٌ لِّلَّذِي بَيْنَ يَدَيْهِ
وَلِيُنذِرَ أُمَّ الْقُرَى وَمَنْ حَوْلَهَا وَالَّذِينَ يُؤْمِنُونَ

Aakhiro waxay Rumeyn Quraanka
Salaaddana way ILaalin.

يَا آخِرَةَ يُؤْمِنُونَ بِهِ وَهُمْ عَلَى صَلَاتِهِمْ
يُحَافِظُونَ ﴿٩٣﴾

Aayadaan hore wuxuu Eebe ku Sheegi inayan Gaaladu Qaddarinin Eebe Mudnaantiisa, markay Dheheen wax Kitaab ah Eebe kuma soo Dejinin Cidna, waxaase La waydiyey yaa soo Dejiyey Tawreedii Nabi Muuse, oy Yuhuuddu Qiraysay oy Qaarna Muujinayeen Qaarna Qarinayeen, lana baray waxayna Aqoon iyaga iyo Aabayaalkood, Kuwaas waa in warkooda layska Dhaafo ha Dabbaasheen Xumaane, Kitaabka Quraanka ahna waa Kitaab Barakaysan, oo Rumayn Xaqii ka horreeyey si loogu digo Dadka, kuwa Rumeeyey Aakhirana way Rumeeyeen Quraankooda, Salaaddana way Ilaalin.

Nabigana waxaa loo diray Dadkoo Dhan, Quraankuna waa Digniinta Caalamka oo Dhan. Siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): waxaa la ii soo Bixiyey Dadka Dhammaantiis.

Taasina waxay ku Waajibin Dadkoo dhan inay Rumeeyaan oo Raacaan kuna Dhaqmaan Quraanka iyo Sunada Nabiga. Al-Ancaam (91-92).

93. Yaa ka Dambi Badan Cid ku Been Abuuratay Eebe ama Yidhi waa Lay Waxyooday Isagoon loo Waxyoonin Waxba, iyo Ciddii Dhahda waxaan soo Dejin waxa Eebe soo Dejiyey oo kale, Haddaad Aragto makay Daali-miintu Sakaraadka Geerida ku Suganyihiin Malaa'igtuna ku Dhihi Iyagoo ku Taagi Gacmaha Bixiya Naftiinna, Maanta waxaa laydinku Abaal marin Cadaab Dulli ah, sababtuna waa waxaad ku Dhahayseen Eebe Xaqdarro ood Ahaydeen kuwo Iska Wayneeya Aayaadkiisa (Waxaad arki lahayd wax Wayn).

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ قَالَ أُوحِيَ إِلَيَّ وَلَمْ يُوحَ إِلَيْهِ شَيْءٌ ۚ وَمَنْ قَالَ سَأُنزِلُ مِثْلَ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَوْ تَرَىٰ إِذِ الظَّالِمُونَ فِي غَمَرَاتِ الْمَوْتِ وَالْمَلَائِكَةُ بَاسِطُوا أَيْدِيهِمْ أَلْحَرُومًا أَنفُسَهُمُ الْيَوْمَ تُجْرُونَ عَذَابَ الْهُونِ بِمَا كَانُوا يَفْكُرُونَ عَلَى اللَّهِ عِبْرَ الْحَقِّ ۚ وَكَسْبُكُمْ عَنْ آيَاتِهِ ۚ تَسْتَكْبِرُونَ ﴿٩٣﴾

94. Waxaad Noo Timaaddeen idinkoo suko ah (kaligiin ah) Sidaan idiinku Abuuray Markii hore, waxaadna kaga Timaaddeen waxaan idinku Nicmaynay Gadaashiinna mana ku Aragno Agtiinna Shafeecayaal - kiinnii, aad Sheegayseen inay Shuruko Yihiin, waxaana Go'ay Xidhiidhkiinnii waxaana idinka Dhumay waxaad Sheeganeyseen.

وَلَقَدْ جِئْتُمُونَا فَرَّدَىٰ كَمَا خَلَقْتُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ ۚ وَكُنْتُمْ مَا خَوَّلْتُمْ وَأَنْتُمْ تَحْمِلُونَ ۚ وَمَا تَرَىٰ مَعَكُمْ شُفَعَاءَ الَّذِينَ زَعَمْتُمْ أَنَّهُمْ فِيكُمْ شُرَكَاءُ ۚ لَقَدْ نَقَطَ بَيْنَكُمْ وَضَلَّ عَنْكُمْ مَا كُنْتُمْ تَزْعُمُونَ ﴿٩٤﴾

Cid ka Dulmi Badan ma jirto Ruux ku Been Abuurtay Eebe ama Sheegtay in loo waxyooday Isagoon waxba loo waxyoonin, ama Sheegtay inuu soo Dejin waxa Eebe soo Dejiyey oo kale, waxayse Dhabta Ogaan marka Sakaraadka Geeridu u Timaaddo, oo Malaa'igtu Garaacdo Iyadoo Canaan, Cadaabna ugu Bishaarayn Xaq darraday ku Hadli jireen iyo Isla waynidoodii Darteed, Cid Kastoo is Qaad

qaaddana waxay uun Eebe u Imaan iyadoo Kali ah, sidii markii hore lagu Abuuray, wax Xoolo ahna ayan Wadanin, wax u Shafeecana uusan Jirin, uuna Go'ay Xidhiidhkii iyaga iyo waxay Caabudi Jireen Eebe ka Sokow. Al-Ancaam (93-94).

95. Eebaa Jeexa Xabbadda Midhaha ah, iyo Timirta, wuxuuna ka soo Bixiyaa wax Nool wax dhimaad ah, kana soo Bixiyaa wax Dhimaad ah wax Nool, Kaasi waa Eebe ee Xaggee laydiinka Ili (Xaqa).

* إِنَّ اللَّهَ قَالِقُ الْحَبِّ وَالْتَوَى يُخْرِجُ الْحَى مِنَ الْمَيِّتِ
وَمُخْرِجُ الْمَيِّتِ مِنَ الْحَى ذَلِكُمْ اللَّهُ قَاتَى
تَوْفَكَوت ﴿٩٥﴾

96. Eebe waa ka Abuuray Iftiinka kana Yeelay Habeenka Qorraxda iyo Dayaxana kuwo wax lugu xisaabsado, Taa-sina waa Maamulka Eebe Adkaada ee og.

قَالِقُ الْإِصْبَاحِ وَجَعَلَ اللَّيْلَ سَكَنًا وَالشَّمْسَ
وَالْقَمَرَ حُسْبَانًا ذَلِكُمْ تَقْدِيرُ الْعَزِيزِ الْعَلِيمِ ﴿٩٦﴾

97. Eebe waa kan idiin Yeelay Xiddigo si aad ugu Toostaan Mugdiga Barriga iyo Badda, waxaan u Caddaynay Aayaadka Ciddii Garan.

وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ التُّجَمَّ لِتَهْتَدُوا بِهَا فِي
ظُلُمَاتِ اللَّيْلِ وَالْبَحْرِ قَدْ فَضَّلْنَا الْآلَاءِ لِقَوْمٍ
يَعْلَمُونَ ﴿٩٧﴾

Eebaa wax Walba Ahaysiiyey, Awooddiisaana wax Walba ku Jiraan, Midhaha soo Bixintooda, Abuuridda waxa Nool, Iftiinka, waxaasoo Dhan waxay ku Jiraan Awooddiisa, Habeenkana wuxuu Eebe ka Yeelay Xasil, Qorraxda iyo Dayaxana Xisaab. Al-Ancaam (95-97).

98. Eebe waa kan Idinka Abuuray Naf kaliya (Nabi Adam) Idiinna Yeelay Sugnaansho iyo Hoyasho, waan u Caddaynay Aayaadka Ciddii wax kasi.

وَهُوَ الَّذِي أَنْشَأَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ فَمُسْتَقَرٌّ
وَمُسْتَوْجِبٌ قَدْ فَضَّلْنَا الْآلَاءِ لِقَوْمٍ يَفْقَهُونَ ﴿٩٨﴾

99. Eebe waa kan ka soo Dejiya Samada Biyo waxaanna ku soo bixin-nay (biyihii) wax kastoo dhulka ka soo dhasha, oo aannu ka soo saarnay (xaggiisa) Doog Cagaaran oon ka soo Saarro Midho is dul saaran, Timirtana Fiiddeeda waxaa ah Laamo Dhow, Beerana (waan ku soo Bixinnaa) oo ah Cinab, Zaytuun, Rummaan (qaar) Isu eg, iyo Qaar aan Isu Ekayn, Daya Midhihiisa markuu Midho Dhalo iyo Bisaylkiisa, Taasina Calaamaa ugu Sugaan Ciddii wax Rumayn.

وَهُوَ الَّذِي أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجْنَا بِهِ نَبَاتَ
كُلِّ شَيْءٍ فَأَخْرَجْنَا مِنْهُ خَضِرًا نُخْرِجُ مِنْهُ
حَبًّا مُتَرَاكِبًا وَمِنَ النَّخْلِ مِنْ طَلْعِهَا قِنْوَانٌ دَانِيَةٌ
وَجَنَّاتٍ مِنْ أَعْنَابٍ وَالزُّيْتُونَ وَالزُّمَانُ مُمْشِيَهَا وَعَصِيرٌ
مُتَسَبِّحٌ أَنْظَرُوا إِلَى شَرِّهِ إِذَا أَثْمَرَ وَيَنْعِهِ إِنْ فِي
ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٩٩﴾

100. Waxay u Yeeleen Gaaladu Eebe Shurako Jinni ah Isagoo Abuuray, waxay ku Sheegeen (Been) Eebe Wiilal iyo Gabdho Iyagoon wax Ogayn, waa ka Nasahanyahay Eebe waana ka Sar-reeyaa waxay ku Sheegi.

وَصَلُّوا لِلَّهِ شُرَكَاءَ الْجِنَّ وَخَلَقَهُمْ وَخَرَقُوا لَهُ بَنِينَ
وَسَبَّاتٍ يَغِيرُهُمْ فَعَلِمُوا مَا يَصِفُونَ ﴿١٠٠﴾

Eebe waa kan ka Abuuray Dadka Aadam, kuna sugay uurka Hooyo, iyo Jidhka Ragga, kuna sugay Adduunka una Celin Aakhiro, Aayaadkana u Caddeeyey Ciddii kasi, Cirkana Roob ka Keenay kuna soo Bixiya Khayraad badan oo Lagu Nacfiyo, oo Ciddii Xaqa Rumayn ay ku waano qaadato, Eebahaas yey Gaaladu u Yeeleen kuwo la Wadaaga Cibaadada oo Jinni ah, Isagoo Abuuray, waxayna ku Sheegeen Carruur Iyagoo Jaahiliin ka ah, Eebana waa ka Dheeryahay waxay ku sheegi, waxaana halkan ka Muuqda Waynida Awoodda Eebe, Naxariistiisa, Caqli Xumada Gaalada iyo xaq Diidnimadooda. Al-Ancaam (98-100).

101. Eebe waa Kan Abuuray Sa-mooyinka iyo Dhulka sideese Ilmo ugu ahaan Isagoon Haweenay lahayn, wax walbana Abuuray wax kastana Og.

بَدِيعَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ أَنَّى يَكُونُ لَهُ وَلَدٌ وَلِئَمْ كُنَّ
لَهُ صُلْحَةً وَخَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ وَهُوَ بِكُلِّ شَيْءٍ
عَلِيمٌ ﴿١٠١﴾

102. Kaasi waa Eebihiiin, isaga mooyee ilaah kale oo xaq Lugu caabudo ma jiro, wax kastana isagaa Abuuray ee Caabuda wax walbana isagaa u Wakiil ah (ILAaliya).

ذَٰلِكُمْ اللَّهُ رَبُّكُمْ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ خَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ
فَاعْبُدُوهُ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ وَكِيلٌ ﴿١٠٢﴾

103. aragyaalku Alle ma koobaan, Isagaase Kooba Arag yaalka (Wuu arkaa Eebe lamase Arko adduunka) Waana wax Oge Xeeldeher.

لَا تَدْرِيكَ أَهْلَ أَبْصَارٍ وَهُوَ يَدْرِكُ الْأَبْصَارَ وَهُوَ
اللطيف الخبير ﴿١٠٣﴾

104. (Waxaad dhahdaa) Waxaa idiin Yimid (Idin soo Gaadhay) Xujooyin Eebihiiin ka yimid, Ciddii Aragta (ku Hanuunta) Naftiisa umbuu wax u taray Ciddii ka Indho Beeshana Naftiisuu Dhibay, anna ma ihi mid idin ILaaln.

فَدَجَّاءَ كُمْ بَصَائِرُ مِنْ رَبِّكُمْ فَمَنْ أَبْصَرَ
فَلَِنَفْسِهِ وَمَنْ عَمِيَ فَعَلَيْهَا وَمَا أَنَا عَلَيْكُمْ
بِحَفِيظٍ ﴿١٠٤﴾

105. Saasaannu u gagadinnaa (Cadday-naa) Aayaadka inay Dhahaan waad Akhrisatay iyo Inaan u Caddayno Ciddii wax Garan.

وَكَذَٰلِكَ نُصِرُكَ لِآيَاتِنَا لِيَقُولُوا دَرَسْتَ
وَلِنُبَيِّنَهُ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿١٠٥﴾

Eebaa wax walba ahaysiiyey, Cir, Dhul iyo wax kastaba, umana Baahna Carruur iyo Haweeney Illeen isagaa wax walba Abuuraye, wax kastana Oge, Tilmaantaas waxaa Mudan Eebe, isaga mooyee ilaah kale oo xaq Lugu caabudo ma jiro, ee ha la Caabudo, waana ILaaliyaha wax kasta, lamana Arko

Adduunka Illeen lama Awoodee, Isaguse wuu Arkaa waana wax walba Oge, Dadkana waxaa Xagga Eebe ka soo Gaadhay Xaq, Ciddii ku waano Qaadata waa Isaga, Tii ka Indho Beeshana waa Iyada, Nabiguna ILaaliye uma aha, waana loo Caddaayey Xaqa, waxaase Jira kuwo ku Sheegi Nabiga inuu Akhristay Quraanka waase kuwa aan wax Ogayn. Al-Ancaam (101-105).

106. Raac Nabiyow waxa lagaaga Waxyooday Xagga Eebahaa, Allaah mooyee macbuud kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, kana Jeedso Mushri-kiinta.

أَسْمِعْ مَا أُوحِيَ إِلَيْكَ مِنَ رَبِّكَ لَأَلِلهِ الْإِهْوَ
وَأَعْرِضْ عَنِ الْمُشْرِكِينَ ﴿١٠٦﴾

107. Hadduu doono Eebe mayna la Wadaajiyeen, kaagamana aannaan Yeelin Ilaaliye, Wakiilna kama tihid.

وَلَوْ شَاءَ اللهُ مَا أَشْرَكُوا وَمَا جَعَلْنَاكَ عَلَيْهِمْ
حَفِظًا وَمَا أَتَّ عَلَيْهِمْ يَوْمَئِذٍ ﴿١٠٧﴾

108. Ha Caayina waxay Caabudi oo Eebe ka soo Hadhay oo Markaas iyana Caayaan Eebe Colnimo iyo Cilmi la'aan, Saasaan ugu Qurxinay ummad kasta Camalkeeda Xagga Eebe Umbay-na Noqoshadoodu tahay wuxuuna uga Warrami waxay Fali Jireen.

وَلَا تَسْمُوا الَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللهِ فَيَسْمُوا
اللهُ عَدُوًّا بِعَدُوِّهِمْ فَكُلَّ رَيْبٍ أَلَمَهُمْ نَسُوا
إِلَىٰ رَبِّهِمْ مَرْجِعُهُمْ فَيُنَبِّئُهُمْ بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٠٨﴾

Eebe wuxuu u Dardaarmay Rasuulkiisa inuu Raaco waxa Eebe u Waxyooday, Illeen Allaah Mooyee Ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma Jiree, iyo inuu Isaga Jeedsado Gaalada, wax walbana Awoodda Eebe unbuu ku jiraa, Nabiguna ILaaliyaha Dadka ma aha.

Tan kale waa inaan la Caayin waxay Caabudi oo Markaas iyana Eebe u Caayin Colnimo iyo Jaahilnimo, Illeen Ummad kastaa waxaa loo Qurxiyey Camalkoodde waxaana loo Celin Xagga Eebahood wuxuuna uga warrami waxay Camal falayeen, waxaa jirtay Gaaladii Qureesh in ay Abiidaalib u Tageen oo ku Dhaheen ha naloo Daayo Ilaahyadanada. Anaguna aan u daynno Ilaahiisa, Haddii kale waxaan Caayaynaa Ilaahay, Markaasay soo Degtay Aayaddu, Taasina waxay ku Tusin in si Miyyir iyo cay la'aan Eebe loogu Yeedho Dadka'ee Canaan, Cay iyo Hadal Adag-wax tarayn. Al-Ancaam (106-108).

109. Waxay ku Dhaarteen Gaaladii Dhaar Adag, Hadday soo Gaadho Aayadi inay Rumaynayaan, waxaad Dhahdaa Aayaadku waxay Jiraan Eebe Agtiisa, maxaase idin ogeysiyyay Had-day Aayaddu soo Gaadho inayna Ru-maynayn.

وَأَقْسَمُوا بِاللَّهِ جَهْدَ أَيْمَانِهِمْ لَئِن جَاءَهُمْ آيَةٌ
لَّيُؤْمِنَنَّ بِهَا قُلْ إِنَّمَا الْآيَاتُ عِنْدَ اللهِ وَمَا
يُشْعِرُكُمْ أَنَّهَا إِذَا جَاءَتْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٠٩﴾

110. Waxaannu Gaddin Quluubtooda iyo Araggooda Sidayna u rumayn Markii horaba, waxaana ku Daynaynaa Iyagoo ku Wareesan Xadgudubkooda.

وَنَقَلِبُ أَقْبَادَهُمْ وَأَنبَصَرَهُمْ كَمَا لَمْ يُؤْمِرُوا
بِهِ أَوَّلَ مَرَّةٍ وَوَدَّ رُحْمُهُمْ فِي طُعْفَيْهِمْ يَوْمَئِذٍ يَعْمَهُونَ ﴿١١٠﴾

111. Haddaan ku soo Dejinno Malaa'ig

* وَلَوْ أَنَّ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا عِندَ رَبِّهِمْ المَلَكَةَ وَكَانَتْ هُمْ المَوْتَىٰ

oo Dadkii Dhintay la Hadlo oon wax kasta Hortooda ku soo Kulminno, mayna rumeeyeen in Eebe doono mooyee, Hase Yeeshee Badankood waa Jaahiliin.

وَحَسْبُنَا عَلَىٰ هَرَمِكُمْ شَيْءٌ وَفِي مَا كَانُوا يَلْعَنُونَ
إِلَّا أَنْ يَشَاءَ اللَّهُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَهُمْ يَجْهَلُونَ ﴿١١٣﴾

Gaaladu wanaagga kuma Toosaan, waxayna ku Deg degaan Dhaarta Eebe, waxaana Jirtay in Gaaladii Makaad ku Dhaaranjireen in Haddii Eebe Mucjasad soo Dejiyo ay Rumayn, Eebaase Awooddaas leh, Hadday soo Gaadhana ma Rumaynayaan, Markay Xaqa diideen ayuna Eebe sii ilay Qalbigooda iyo Araggooda, si ay Xumaanta ugu Dhexwareeraan Xataa Haddii Malaa'ig lagu soo Dejiyo, Dadkii Dhintayna la Hadlo, wax walbana la horkeeno ma Rumaynayaan Xaqa in Eebe Doono Mooyee, Badankooduna waa Jaahiliin.

Taasina waxay ku Tusin Xaqiiqada Gaalada iyo Siday uga soo Hor Jeedaan Wanaagga. Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Markay Gaaladu diideen waxa Eebe soo Dejiye Qalbigoodu kuma Sugnaanin waxba, wax walbana Way diideen. Al-Ancaam (109-111).

112. Saasaan ugu Yeellay Nabi Kasta Col Shaydaan Insi iyo Jinniba leh, oo Qaarkood qaarka kale u Waxyoona (Sheegi) Hadal la Dhoob-Dhoobay, Dhummin Darteed, Hadduu Eebe Doonana mayna Faleen ee Iskaga Tag iyaga iyo waxay Been-Abuuran.

وَكَذَلِكَ جَعَلْنَا لِكُلِّ نَبِيٍّ عَدُوًّا شَاطِئِينَ
إِلَّا إِبْرَاهِيمَ وَالْحَبِيبَ يُوحَىٰ بَعْضُهُمْ إِلَىٰ بَعْضٍ زُخْرَفَ
الْقَوْلِ غُرُورًا وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ مَا فَعَلُوهُ فَذَرْهُمْ
وَمَا يَفْعَلُونَ ﴿١١٢﴾

113. Iyo in ay u iilato Quluubta Kuwaan Rumayn Aakhiro, iyo Inay ka Raalli Noqdaan, iyo inay Kasbaadaan waxay Guranayeen.

وَلِيَتَصَوَّرَ إِلَيْهِ أُمَّةٌ أَلْفٌ مِنَ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ
وَلِيَرِضَهُمْ وَلِيَقْتَرِفُوا مَا هُمْ مُّقْتَرِفُونَ ﴿١١٣﴾

114. Ma Diinta Eebe waxaan ahayn yaan u Dooni Xaakim Isagoo idiin soo Dejiyey Kitaabka oo la Caddeeyey, kuwaan Siinay Kitaabka waxay Ogyihiin in Quraanka laga soo Dejiyey Xagga Eebahaa ee ha Noqonin kuwa Shakiya.

أَفَعَبَّرَ اللَّهُ أَنْتَنِي حَكَمًا وَهُوَ الَّذِي أَنْزَلَ
إِلَيْكُمْ الْكِتَابَ الْمَقْصُودَ وَالَّذِينَ آتَيْنَاهُمُ
الْكِتَابَ يَعْلَمُونَ أَنَّهُ مُنَزَّلٌ مِنْ رَبِّكَ بِالْحَقِّ
فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ الْمُمْتَرِينَ ﴿١١٤﴾

115. Waxay ku Taam Noqotay Kali-mooyinka Eebahaa run iyo Caddaalad, wax Badali Kalimooyinka Eebana ma jiro, Eebana waa Maqle og.

وَمَنْتَ كَلِمَتُ رَبِّكَ صِدْقًا وَعَدْلًا لَا مُبَدِّلَ
لِكَلِمَاتِهِ وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿١١٥﴾

Nabi kasta wuxuu lahaa Col Insi iyo Jinniba leh, oo wax Isu sheega, Wuxuuna Eebe Faray Nabiga inuu Warka Gaalada Iskaga Fogaado, Illeen waxay Maqashaa Quluubta Kuwaan Rumayn Xaqa waxa Xune, Eebe waxaan Ahayn ma Mudna in xaakin laga Yeesho, Illeen isagaa soo Dejiyey Kitaabka Quraanka ah oo Cad, Yuhuud iyo Nasaarana waa Ogyihiin in Xagga Eebahaa looga soo Dejiyey si Xaqa, in la Shakiyana ma Habboona, Sharciga Eebana waa Dhanyahay isagoo Run iyo Caddaalad ah, wax Badali karana ma jiro, Eebana waa Maqle Og.

Saas Darteed waa in Xaqa lagu Toosnaado Shaydaanna laga Digtoonaado Insi iyo Jinba. Waxaa Sugnaaday in Abuukar Warsaday Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) In Dadku Shaydaanno leeyahay oo uu Ku Yidhi: Haa. Al-Ancaam (112-115).

116. Haddaad Maqashid waxa Dhulka ku Sugaan Badankooda waxay kaa Dhumin Jidka Eebe, mana Raacayaan waxaan Malo ahayn waana Beenaalayaal.

وَأَنْ تُطِيعَ أَكْثَرَ مَنْ فِي الْأَرْضِ يُضِلُّوكَ عَنْ سَبِيلِ
اللَّهِ إِنْ يَتَّبِعُونَ إِلَّا الظَّنَّ وَإِنْ هُمْ إِلَّا
يَخْرُصُونَ ﴿١١٦﴾

117. Eebahaa yaa og Cidda ka Dhumi Jidkiisa, Isagaana og Cidda Hanuunsan.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ مَنْ يَضِلُّ عَنْ سَبِيلِهِ ۗ وَهُوَ أَعْلَمُ
بِالْمُهْتَدِينَ ﴿١١٧﴾

118. Ee Cuna waxa Magaca Eebe lagu Xusay Haddaad Aayaadkiisa Rumaynaasaan.

فَكُلُوا مِمَّا ذُكِّرَ أَنْسَمُ اللَّهُ عَلَيْهِ إِنْ كُنْتُمْ
بِعَابَتِهِ مُؤْمِنِينَ ﴿١١٨﴾

119. Maxaad la Cuni waydeen waxa Magaca Eebe lagu Xusi, Isagoo laydiin Caddeeyey waxa Laydinka Reebay inaad Dhibbantihii Mooyee, wax Badan waxay ku Dhumin (Dadka) Hawadooda Cilmi darro, Eebahaana waa Ogyahay kuwa Xad-gudba.

وَمَا لَكُمْ أَلَّا تَأْكُلُوا مِمَّا ذُكِّرَ أَنْسَمُ اللَّهُ عَلَيْهِ
وَقَدْ فَصَّلَ لَكُمْ مَا حَرَّمَ عَلَيْكُمْ إِلَّا مَا اضْطُرِرْتُمْ
إِلَيْهِ ۗ وَإِنَّ كَثِيرًا لَيُضِلُّونَ بِأَهْوَاءِهِمْ بِغَيْرِ عِلْمٍ ۗ إِنَّ
رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ بِالْمُعْتَدِينَ ﴿١١٩﴾

Dadka Badankiisu waxay Dhumiyaan Dadka, waxaan malo iyo Been ahayna ma Raacaan, Eebana waa ogyahay Cidda Dhuntay iyo Tan Hanuunsan.

Tan kale wuxuu Eebe u Banneeyey Dadka Rumeeyey inay Cunaan waxa Magaca Eebe lagu Xusay, Illeen Eebaa Caddeeyey waxa la Reebay Haddaan Dhibaato Jirin, Dadka Badankiisuna waxbay Dhumiyaan Cilmi Darro, Eebana Isagaa og Cidda Hanuunsan.

Aayaduhuna waxay Muujin in laga Digtoonaado Xumaan Farayaasha, Xalaashana la Cuno. Xaaraantana laga Dheeraado. Al-Ancaam (116-119).

120. Ka Taga Dambiga Muuqda iyo Kan Qarsoonba, kuwa Kasbada Dambigana waxaa laga Abaal marin waxay Kasbanayeen.

وَذُرُوا ظَاهِرَ الْأَيْدِي ۗ وَأَبْطِئَةُ الَّذِينَ يَكْسِبُونَ
الْآثِمَةَ سَيَجْرَتُونَ بِمَا كَانُوا يَقْتَرِفُونَ ﴿١٢٠﴾

121. Ha cunina waxaan lagu Xusin Magaca Eebe, Illeen waa Xumaane, Shaydammaduna waxbay u Sheegaan Saaxiibkooda si ay idinla murmaan, Haddaad Maqashaanna waxaad Noqonaasaan Gaalo.

وَلَا تَأْكُلُوا مِمَّا لَمْ يُذْكَرْ أَنْسَمُ اللَّهُ عَلَيْهِ وَإِنَّهُ
لَفِسْقٌ وَإِنَّ الشَّيْطَانَ لِيَوتِنُوكَ ۗ إِنَّ آوِيَاتِهِمْ
لِيَجْعَلَ لَكُمْ ۗ وَإِنْ أَطَعْتُمُوهُ فَذُكِّرْ لَمْ تُسْرِكُونَ ﴿١٢١﴾

122. Cid mayd ahayd oon noolaynay oon u Yeellay Nuur uu ku Dhex socdo Dadka ma lamidbaa mid Mugdi ku Sugan oon ka baxayn, Saasaana loogu Qurxiyey Gaalada waxay Falayeen.

أَوَمَنْ كَانَ مِيتًا فَأَحْيَيْنَاهُ وَجَعَلْنَا لَهُ نُورًا يَمْشِي بِهِ فِي النَّاسِ كَمَنْ مَتَّعَهُ فِي الظُّلُمَاتِ لَيْسَ بِخَارِجٍ مِنْهَا كَذَلِكَ نُزِّنُ لِلْكَافِرِينَ مَا كَانُوا يَسْمُؤُونَ ﴿١٢٢﴾

Aayadda hore wuxuu Eebe ku faray in Dambiga Dhammaantiis laga Tago, Mid Muuqda iyo mid Qarsoonba, Ciddii Dambi kasbatana waa laga Abaal marin wuxuu kasbaday, Dambina waa waxa laabtaada kiciya ood Neceb tahay in Dadku kugu arko, Siduu Nabigu Yidhi (Naxariis iyo Nabadgalayo Eebe Korkiisa ha yeelee).

Aayadda kalana waxay Reebi in la Cuno waxaan Magaca Eebe lagu Xusin marka la Gawrici, uuna yahay Jidka Fiican oo laga Baxo, Illeen Shaydaanka yaa wax u Sheega Saaxiibadiis si ay uguna murmaan Muslimiinta, Ciddii warkaas maqashana oo Raacda waa mid Gaalowday.

Yuhuudbaa Nabiga ku Tidhi: - ma waxaan Cunaynaa waxaan Dillay Oynaan Cunayn waxa Eebe Dilay, Markaasay soo degtay Aayaddu.

Tan kale waa Tusaale Eebe u Yeelay Cidda Hanuunsan iyo Cidda Dhunsan oo Shabaha Mayd iyo Noole, Illeen midina Nuur buu ku Socdaa midina Mugdi buu ku Suganyahay uusan ka baxayn, Gaalana waxaa loo Qurxiyey waxa Xun oy Falayaan, Aayaduhuna waxay Muujin in Xumaanta laga Tago, Xalaashana la Cuno, Shaydaankana laga Digtoonaado, Jidka Fiicanna la Qaado. Al-Ancaam (120-122).

123. Saasaan ugu Yeellay Magaalo kasto Dambiilayaal waawayn, inay wax ku Dhagraan Dhexdeeda, waxaan Naftooda ahayna ma Dhagrayaan mase oga.

وَكَذَلِكَ جَعَلْنَا فِي كُلِّ قَرْيَةٍ أَكْبَرًا مُجْرِمِيهَا لِيَسْتَكْفُرُوا فِيهَا وَمَا بُدِئُوا إِلَّا بِأَنْفُسِهِمْ وَمَا يَشْعُرُونَ ﴿١٢٣﴾

124. Markay soo Gaadho aayad waxay Dhahaan Rumayn maynno inta naloo-ga keeno wixii la siiyey Rasuulladii Eebe, Ilaahay baana og Meeshuu Yeeli Rasuulnimada, waxaana ku Dhici kuwii Dambaabay Dulli Eebe Agtiisa ah iyo Cadaab Daran waxay Dhagrayeen Dar-teed.

وَإِذْ آجَاءَ نَهْرٌ آيَةٌ قَالُوا لَنْ نُؤْمِنَ بِحَقِّ نُوْقٍ مِثْلَ مَا أُوتِيَ رُسُلُ اللَّهِ اللَّهُ أَعْلَمُ حَيْثُ يَجْعَلُ رِسَالَتَهُ سَيُصِيبُ الَّذِينَ أَجْرَمُوا صَغَارٌ عِنْدَ اللَّهِ وَعَذَابٌ شَدِيدٌ بِمَا كَانُوا يَمْكُرُونَ ﴿١٢٤﴾

125. Cidduu Eebe Hanuuniyo wuxuu u Waasiciyaa Laabtiisa Islaamka, Cidduu Doono inuu Dhumiyaana wuxuu ka Yeelaa Laabtiisa Cidhiidhi «Dhib» ah sidii Isagoo Kori samada, saasuuna u yeelay Alle Xumaanta korka Kuwaan Rumaynin Xaqa.

فَمَنْ يُرِدِ اللَّهُ أَنْ يَهْدِيَهُ يَشْرَحْ صَدْرَهُ لِلْإِسْلَامِ وَمَنْ يُرِدْ أَنْ يُضِلَّهُ يَجْعَلْ صَدْرَهُ ضَيِّقًا حَرَجًا كَمَا كُنَّا يَضَعُهُ فِي السَّمَاءِ كَذَلِكَ يَجْعَلُ اللَّهُ الرِّجْسَ عَلَى الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٢٥﴾

Meel kasta waxaa Jooga Dad Xun oo Fasaad ka Shaqeyaa, Dhagarna Maleega, Xaqana Beeniya Iyagoo Codsan in la Tusiyo Muejisooyin la mida Kuwii Hore, Awoodda iyo Tasarufkase Eebaa iska leh, waxaana ku Dhici Dambiilayaasha Dulli iyo Cadaab Daran Dhagartooda Darteed, Eebana Isagaa og Cidduu Dooran iyo Cidduu u waxyoon. Cidduu Eebe hanuun la doono Laabtiisuu u Waasiciyaa Xaqa, Ciddii Kalana Laabteeduu Cidhiidhi ka Yeelaa Sidii Ruux Samada u Koraya, Xumaanna waxay ku

dhantahay Kuwaan Rumaynin Xaqa.

Nabigana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) waxaa la warsaday Laabta la Waasiciyey, wuxuuna Yidhi: Waa Nuur Eebe ku Tuuro Qalbiga Ruuxa, markaasay Dheheen maxaa lagu garan? Markaasuu Yidhi: Aakhiro oo loo diyaargarooobo, Adduunyadoon lagu Khaldamin, iyo diyaargarow geeri ka Hor. Al-Ancaam (123-125).

126. Wakaas Jidkii Eebahaa oo Toosan Aayaadkana waxaan u Caddaynay Ciddii wax Xusuusan.

وَهَذَا صِرَاطُ رَبِّكَ مُسْتَقِيمًا فَدَفَّصْنَا الْأَيَّاتِ
لِقَوْمٍ يَذَّكَّرُونَ ﴿١٢٦﴾

127. Waxayna Mudanyihiin Guri Nabadgalyo oo Eebahood Agtiisa ah, Isagaana Gargaarahooda ah waxay Camal falayeen Dartiis.

كُلُّهُمْ دَاوْرٌ أَلَسَّ لِعِنْدَ رَبِّهِمْ وَهُوَ وَابِعُهُمْ بِمَا
كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٢٧﴾

128. Xusuuso Maalintuu Eebe Kulmin Dhammaantood (kuna dhihi) Kulanka Jinniyow waad badsateen (Baadiyeynta) Insiga waxayna Dhehaan Saaxiibadood oo Insiga ah Eebahannow Qaarkanno qaarbuu ku shaqaystay waxaana Gaadhay Ajashaad (Mudaadaad) noo Samaysay, wuxuuna ku yidhi: Naar baa hoyaadkiinna ah, idinkoo ku waari dhexdeeda wuxuu Eebe Doono Mooyee, Eebahaana waa Fal-same Oge ah.

وَيَوْمَ نَحْشُرُهُمْ جَمِيعًا بِنِعْمَةِ الْجِنِّ قَدْ
أَسْتَكْبَرْتُمْ مِنَ الْإِنْسِ وَقَالَ أَوْلِيَاؤُهُمْ مِنَ
الْإِنْسِ رَبَّنَا اسْتَمْتَعَ بَعْضُنَا بِبَعْضٍ وَبَلَّغْنَا أَجَلَنَا
الَّذِي أَجَلْتَنَا قَالَ الْتَأْمَتُوا نَوْمَكُمْ خَلَّيْنِ فِيهَا
إِلَّا مَاشَاءَ اللَّهُ إِنَّ رَبَّكَ حَكِيمٌ عَلِيمٌ ﴿١٢٨﴾

129. Saasaana ugu Dirraa Daalimiinta Qaarkood Qaarka kale waxay Kasba-nayeen Darteed.

وَكَذَلِكَ نُؤَيِّبُ بَعْضَ الظَّالِمِينَ بَعْضًا بِمَا كَانُوا
يَكْسِبُونَ ﴿١٢٩﴾

Markuu Eebe Sheegay Jidka Kuwa Dhumay yuu Raaciyey Jidka Toosan ee Xaqa ah, waana u Cadyahay Ciddii Waantoobi, waxaana kuwaas u sugnaaday Guri Nabadgalyo oo Jannada ah, Illeen Xumaan iyo Balaayoo Dhan yey ka nabadgashaye, Eebaana Gargaare u ah Camalkooda Dartiis. Markaasuu Eebe Sheegay soo Kulmin Insi iyo Jinniba oy Markaas Sheegi in Midkood kan kale ku Intifaacy intay ka Gaadhaan Muddaduu Eebe U Qabtay, Taasoo ah in Insigu magan gali jiray Jinniga, wuxuuse Eebe Ku Xukumay Naaray ku Waari, wuxuu Eebe Doono Mooyee, Waxaana Caadi ah in Daalimiinta Qaarkood qaar lagu Diro oo taladiisa uu Gaacanta ku dhigo, Taasina waxay ku Tusin in Gaaladu Sokeeye isuyihiin, Siduu Yidhi Qataade: Mu'minku waa Sokeeyaha Mu'minka Meelkastooy Joogaan, Gaaladuna waa Sokeeyaha Gaalka Meel kastooy Joogaan. Al-Ancaam (126-129).

130. Jinni iyo Insiyow Miyuuna idiin Imaanin Rasuullo Idinka mid ah oo idiinka Warrama Aayaadkayga idiinkana Diga la kulanka Maalintan, waxay-

بِنِعْمَةِ الْجِنِّ وَالْإِنْسِ أَلَّا يَأْتِيَكُمْ رَسُولٌ
مِّنْكُمْ يَفْضُلُ عَلَيْكُمْ ؕ إِنِّي

na Dheheen waan ku Marag furray Naftannada, waxaa na Dhagartay Nolosha Dhaw, waxayna ku Marag fureen Naftooda inay gaalo ahaayeen.

131. Arrintaasna waa Inaan Eebahaa halaagin Magaalo Dulmi Dartiis iyadoo Dadkeedu halmaansanyihiin (aan loo digin).

132. Cid kasta Darajooyin yey Leedahay oo waxay Camal fashay ah, Eebahaana ma ah mid halmaansan waxay Camal Faleen.

133. Eebahaana waa Hodan Naxriis badan, Hadduu Doono wuu idin Baabi'in idinkuna Bedali Gadaashiin Cidduu Doono, siduu idiinka Abuuray Faracii Qoom kale.

134. Waxa laydiin Yaboohi wuu Imaan, Eebana Ma daalisaan.

135. Waxaad Dhahdaa Qoomkayow ku Camal Fala Sidiinnaas, anna waan Camal faliye, waxaadna Ogaan doontaan Cidday Cidhib Dambe u ahaatee, mana Liibaano Daalime.

Aayadahanna wuxuu Eebe ku Sheegey in Qiyaamada la Warsan Gaalada Insi iyo Jinniba inuu u Yimid Rasuul u Diga iyo in kale, waxay isku marag fureen inay u Timid, waxaase Khayaantay Adduunyadii, waxayna isku marag Fureen inay Gaalo ahaayeen, Eebana ma Halaago Dad uusan u soo Dirin Hanuuniye, Cid walbana waxay mudan Darajo waxay kasbatay, Eebana ma halmaamo waxay Fali Dadku.

Eebana waa Hodan Naxariista, Cidduu Doonana wuu Halaagi oo mid kale ku Badali, wax Eebbe Daalinaa ma jiro, Cid walbana ha Fasho waxay Rabto, Daalimna ma Liibaano. Al-Ancaam (130-135).

136. Waxay uga yeeleen Eebe wuxuu Abuuray oo Beero iyo Xoola ah qayb, waxayna Dheheen kan Eebaa iska leh, Sheegashadooda, kanna waxaa iska leh Shurukadanada (Sanamyada), waxa Sanamyadu ma Gaadho Eebe, waxa Eebana wuxuuu Gaadhaa Sanamyadooda, waxaa Xun waxay Xukumeen.

137. Saasayna ugu Qurxiyeen in Badan

وَيُنذِرُونَكُمْ لِقَاءَ يَوْمِكُمْ هَذَا قَالُوا شَهِدْنَا عَلَىٰ أَنفُسِنَا وَعَنَزْتَهُمُ الْحَيَاةُ الدُّنْيَا وَيَسْهَوْنَ عَلَىٰ أَنفُسِهِم أَنَّهُمْ كَانُوا كَافِرِينَ ﴿١٣١﴾

ذَلِكَ أَنْ لَوْ لَيْكَ نَزُّكَ مُهْلِكَ الْقُرَىٰ يَطَّلُرُ وَأَهْلُهَا عَافِيُونَ ﴿١٣٢﴾

وَلِكُلِّ دَرَجَةٍ مِمَّا عَمِلُوا وَمَا رَبُّكَ بِغَفِيلٍ عَمَّا يَعْمَلُونَ ﴿١٣٣﴾

وَرَبُّكَ الْغَنِيُّ ذُو الرَّحْمَةِ إِنْ يَشَاءُ يُدْهِبْكُمْ وَيَسْتَخْلِفْ مِنْ بَعْدِكُمْ مِمَّا يَشَاءُ كَمَا أَنْشَأَكُمْ مِنْ ذُرِّيَةِ قَوْمٍ آخَرِينَ ﴿١٣٤﴾

إِنْ مَا تُوْعَدُونَ لَأَتِيَنَّ وَمَا أَنْتُمْ بِمُعْجِزِينَ ﴿١٣٥﴾

فَلْيَقُومُوا أَعْمَلُوا عَلَىٰ مَكَاتِكُمْ إِيَّيْ عَامِلٌ فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ مَنْ تَكُونُ لَهُ عَاقِبَةُ الدَّارِ إِنَّهُ لَا يُفْلِحُ الظَّالِمُونَ ﴿١٣٦﴾

وَجَعَلُوا لِلَّهِ مِمَّا ذَرَأَ مِنَ الْحَرْثِ وَالْأَنْعَامِ نَصِيبًا فَقَالُوا هَذَا لِلَّهِ بِرِعْمِهِمْ وَهَذَا لِشُرَكَائِنَا فَمَا كَانَ لِشُرَكَائِهِمْ فَلَا يَصِلُ إِلَى اللَّهِ وَمَا كُنَّا لِلَّهِ قَدِيرِينَ ﴿١٣٧﴾

وَكَذَلِكَ زَيْنَ لِكَيْبَرِيَّتِ الْمُشْرِكِينَ

oo Gaalada ah Dilidda Caruurtooda Shurukadoodu (Shayaadiintu), si ay u Halaagaan kana Khaldaan Diintooda, hadduu Eebe Doonana mayna Faleen ee Isaga Tag iyaga iyo waxay Been Abuuran.

138. Waxay Dheheen Tan waa Nicmoolay iyo Beer Reeban oosan ka Quudanayn Ciddaan Doonno Mooyee, Sheegashooda, iyo Nicmoolay la Xarrimay Dhabarkeeda (In la rarto) iyo Nicmoolay aan Magaca Eebe lagu Xusayn, ku Been abuurasho Darteed, wuxuu ka Abaal marin Eebe waxay Been Abuuranayeen.

Aayadahanna waa Canaan iyo Guulid Gaaladii Qaybisay Xoolaha iyo Beeraha oo Qaarna Eebe ku Sheegay Qaarna Sanamyada, hadduu waxa Sanamku ku Darmado Kan kalana ay soo Celinayaan. Hadduu kay Eebe ku Sheegeen ku Darmadana Daayaan, waana Xaal Guud ahaan u Xun, waxaa kaloo Sanmyadu u Qurxiyeen Gaalada Dilidda Caruurtooda, Iyagoo Xoolana gaar ka reebay inuus Hilibkooda Cunayn ciddayna Doonin, Qaarna ay siidaayeen, qarna aan lagu Gowracayn Magaca Eebe, waxaasuna waa wax Eebe ka Abaal marin oo Beena, ku Tusinna Caqli Xumada Gaalada iyo Garasha darridooda. Al-Ancaam (136-138).

139. Waxay Dheheen Gaaladii waxa ku Jira uurka Nicmoolaydan waxay Gaar u tahay Raggannaga waxayna ka Reebantahay Haweenkannaga, hadday Bakhti tahayna way wadaagi, wuxuu ka Abaal marin Eebe Tilmaantooda, Illeen waa Falsame Oge.

140. Waxaa Dhab u Khasaaray kuwa Dilay caruurtooda Caqli Xumo Darteed iyo Cilmi la'aan oo Reebay wixii Eebe ku Arzuqay Been abuurasho Eebe Darteed, way Dhumeen mana Hanuunsana.

141. Eebe waa kan soo Bixiyey Beero la Dhisay iyo Kuwaan Dhisnayn, iyo Timir, iyo tallaala kala uu Duwanyahay waxa laga Cunayo (mirihiisu), iyo

قَتَلْ أَوْلَادِهِمْ شُرَكَّاؤُهُمْ لِيُذْهِبُوا عَنْهُمْ
وَلِيَسْأَلُوا عَلَيْهِمْ وَيُنْفِثُوا فِي آفَاتِهِمْ
مَا قَالُوا فَذَرْهُمْ وَمَا يَفْكُرُونَ ﴿١٣٧﴾

وَقَالُوا هَذِهِ أَمْهَاتُكُمْ فَذَرْهُمْ
لَا يَنْظَعُهَا إِلَّا
مَنْ نَشَاءُ بَرَعِيْمُهُمْ وَأَلْفُ حُرْمَتٍ طُهُورُهَا
وَأَنْعَمُ لَا يَذْكُرُونَ أَسْمَاءَ اللَّهِ عَلَيْهَا
أَفْتِرَاءً عَلَيْهِمْ سِيَئَاتِهِمْ بِمَا كَانُوا يَفْكُرُونَ ﴿١٣٨﴾

وَقَالُوا مَا فِي بُطُونِ هَذِهِ الْأَنْعَامِ خَالِصَةٌ
لِذُكُورِنَا وَمُحَرَّمٌ عَلَى الْأُنثَى وَإِنْ يَكُنْ
مَيْتَةً فَهُمْ فِيهِ شُرَكَّاؤُ سَيِّئَاتِهِمْ
وَصَفَّهُمْ اللَّهُ فَحَكِيمٌ عَلِيمٌ ﴿١٣٩﴾

فَدَحَّسِرَ الَّذِينَ قَتَلُوا أَوْلَادَهُمْ سَفَهًا بِغَيْرِ
عِلْمٍ وَحَرَّمُوا مَا رَزَقَهُمُ اللَّهُ افْتِرَاءً عَلَى اللَّهِ
فَقَضَّوْا وَمَا كَانُوا مُهْتَدِينَ ﴿١٤٠﴾

﴿ وَهُوَ الَّذِي أَنْشَأَ جَنَّاتٍ مَعْرُوسَاتٍ وَعَبَّارٍ
مَعْرُوسَاتٍ وَالزَّخْلِ وَالزَّرْعِ مُخْتَلِفًا أُكُلُهُ ﴾

Saytuun, iyo Rummaan isu eg iyo qaraan isu ekeyn, ka Cuna midhihiisa markuu miro bixiyo. Bixiyana xaqiisa (sakada) Maalinta la goyn, hana Xad Gudbina Eebe ma Jecla kuwa Xadgud-bee.

وَالرَّيْبُورَ وَالرَّمَامَ مُشْتَبِهًا وَعَيْرَ مُتَشَبِهٍ
كُلُوا مِنْ ثَمَرِهِ إِذَا أَثْمَرَ وَآتُوا حَقَّهُ وَرُؤُوفًا
حَصَادِهِ وَلَا تُسْرِفُوا إِنَّهُ لَا يُحِبُّ
الْمُسْرِفِينَ ﴿١٤١﴾

142. Nicmoolayda xaggeeda wuxuu ka abuuray mid la Rarto, iyo mid kuwa yar yara, ka Cuna waxa Eebe idinku Arzaaqay hana raacina Tallaabooyinka Shaydaanka Illeen waa Colkiinna oo Cade.

وَمِنَ الْأَنْعَامِ حَمُولَةً وَفَرْشًا كُلُوا مِمَّا
رَزَقَكُمُ اللَّهُ وَلَا تَبْغُوا خُطُوبَ الشَّيْطَانِ
إِنَّهُ لَكُرْءُودٌ مُمِيزٌ ﴿١٤٢﴾

Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Caanaha waxay a Diidi Jireen Gabdhaha waxayna Siin jireen Wiilasha, hadduu Neefka dhaddiga ah Lab Dhalo way Gawrici Jireen, waxayna Siin Jireen Ragga, Hadduu Dhadig Yahayna way Dayn Jireen, hadduu Bakhti yahayna way Wadaagi Jireen, Markaasuu Eebe ka Reebay Arrintaas, waxaa kale oo uu Yidhi: Haddaad Dooni Inaad Ogaato Jaahilnimadii Carab Akhri waxa ka Sarreeya boqol iyo Soddan Suuradda Ancaam.

Aayadaha kalana wuxuu Eebe ku Sheegay Nicmooyinka iyo Khayraadka Dhulka ka soo Baxa, wuxuuna faray in laga Bixiyo Xaqiisa, oon laguna Xad gudbin, Xoolahan waxaa ka mid ah kuwo la Rarto iyo kuwo yar yar, waana in Nicmada Eebe si Fiican loo Cuna oo lana raacin Waddooyinka Shaydaanka Illeen waa Colka Dadkee, mana habboona in Nicmada Eebe lagu Kibro ama lagu Xadgudbo. Al-Ancaam (139-142).

143. Waa Siddeed Nooc Labo Ido ah iyo Labo Riyo ah (Lab iyo Dhidig) ma Labada Lab yuu Reebay Eebe Mise Labada Dhadig mise waxa Uurka kuwa Dhadig ku Jira, noo Warrama cilmi haddaad Run Sheegaysaan.

ثَمَانِيَةَ أَزْوَاجٍ مِّنَ الضَّأْنِ اثْنَيْنِ وَمِنَ الْمَعْنِ
اثْنَيْنِ فَلِئَلْذَكَرَيْنِ حَرَمًا أَوِ الْأُنثَيْنِ أَمَّا
أَشْتَمَلَتْ عَلَيْهِ أَرْحَامُ الْأُنثَيْنِ يُتَوَنَّى بِعِلمٍ إِنْ
كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿١٤٣﴾

144. Geelana Labo ka mida Lo'dana labo, dheh ma labada Lab yuu Eebe reebay mise kuwa Dhadig mise waxa Uurka kuwa Dhadig ku Jira, mise Marag baad ka ahaydeen markuu idin Faray Eebe Sidaas, Yaasa ka Dulmi badan Cid ku Been abuurtay Alle, si uu u Dhumiyoo Dadka Cilmi Darro, Eebana ma hanuuniyo Qoom Daalimiina.

وَمِنَ الْإِبِلِ اثْنَيْنِ وَمِنَ الْبَقَرِ اثْنَيْنِ فَلِئَلْذَكَرَيْنِ حَرَمًا أَوِ الْأُنثَيْنِ أَمَّا أَشْتَمَلَتْ عَلَيْهِ أَرْحَامُ الْأُنثَيْنِ أَمْرُكُمْ شُهُدَاءَ إِذْ وَصَّيْكُمْ اللَّهُ بِهَدْيِ أَقَمْتُمْ أَظْلَمُ مِمَّنْ أَقَرَّتْ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا لِيُضِلَّ النَّاسَ بِعَدْوِي عِلمٍ إِنْ اللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴿١٤٤﴾

145. Waxaad Dhahdaa kama helayo waxa lay waxyooday wax ka Reebban Cidda Cuni oon ahayn, Bakhti, Dhiig

فَلِئَلْأَجْدُ فِي مَا أَوْحَىٰ إِلَيْكَ مُحَرَّمًا عَلَىٰ طَاعِمٍ يَطْعَمُهُ إِلَّا أَنْ يَكُونَ مَيْتَةً أَوْ دَمًا مَّفْسُوحًا

Butaaci, Hilib Doofaar, Illeen waa Nijaase iyo wax Xun oo lagu Gawracay Magaca Eebe waxaan ahayn, Ruuxii Baahda Dulmi iyo xadgudub la'aan, Eebahaa wuu u Dambi Dhaafi una Naxariisan. (hadduu baahidaa u Cuno).

أَوَلَحْمٍ خَنزِيرٍ فَإِنَّهُ رِجْسٌ أَوْ فِسْقًا أُهْلًا لِعَبِيرِ
اللَّهِ يَبُوءُ فَمَنْ أَضْطَرُّ عَلَيْهِ بَيْعٌ وَلَا عَمَادٍ فَإِنَّ
رَبَّكَ عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٤٥﴾

Aayadaha hore waxay Caddayn Jaahilnimadii Carbeed Islaamka ka hor, Markay Xaaraan Yeeleen Xoolaha Qaarkood, waxaasi waa Beentooda ay dooni inay Dadka ku Dhumiyaan, Eebana ma toosiyo Daalimiinta, waxaana jiray nin la Dhihi Jiray Camar Binu Luxayi oo Dadka u Horseeday waxyaalahaas, Dhabtuna waa in Xaaraantu tahay Bakhtiga, Dhiig Butaaci, Hilibka Doofaarka, Illeen waa nijaase, iyo wax Xun oo lagu Gowracay Waxaan Magaca Eebe ahayn, waxay Diintu u Reebtay waxaasna waa Xigmad wayn, oo Qaarna Muuqdo Qaarna Qarsoonyahay, wax yaalo kalana waa Jiraan. Al-Ancaam (143-145).

146. Kuwa Yuhuudda ah waxaan ka reebnay wax kastoo Ciddi leh, Lo'da iyo Adhigana waxaan ka reebnay Baruurtooda, waxay Dhabarka ku qaadnaan (Baruurta Dhabarka) mooyee, ama Uur ku jirta, ama wixii ku Dheehan Laf, saasaana ku Abaal marinay Dulmigooda Dartiis, Runbaanna Sheegaynaa.

وَعَلَى الَّذِينَ هَادُوا حَرَّمْنَا كُلَّ ذِي ظُفْرٍ
وَمِنَ الْبَقَرِ وَالْغَنَمِ حَرَّمْنَا عَلَيْهِمْ شُحُومَهُمَا
إِلَّا مَا حَمَلَتِ ظُهُورُهُمَا أَوِ الْحَوَايَا أَوْ مَا اخْتَلَطَ
بِعَظْمٍ ذَلِكَ جَزَيْنَهُمْ بِسِعْوِهِمْ وَإِنَّا
لَصَدُوقُونَ ﴿١٤٦﴾

147. Hadday ku Beeniyaan waxaad dhahdaa Eebihiiin waa Naxariis badane lagamana Celiyo Ciqaabtiisa qoomka Dambilayaasha ah.

إِن كَذَّبْنَاكَ فَقُلْ رَبُّكُمْ ذُو رَحْمَةٍ وَاسِعَةٍ
وَلَا يُسْرَدُ بِأَسْئَرِهِ مِنَ الْقَوْمِ الْمُجْرِمِينَ ﴿١٤٧﴾

Yuhuud way Kibirtay, Markaasaa Eebe ku Ciqaabay inuu ka Xarrimay Hilibka waxa Ciddida leh, sida Geela, Gorayada iyo wixii la mida, sidoo kale waxaa laga Xarrimay Baruurta Lo'da iyo Adhiga, waxa Dhabarka kaga Yaalla, ama Uur ku jirta ku Sugaan ama Laf ku Dheehan Mooyee.

Saasaana loo Ciqaabaa Ciddii Kibirta, Eebana waa Runle, Hadday Yuhuud iyo Gaaladuna Beeniyaan Nabiga, Eebe waa Naxariis badane Ciddii Toobad keenta, Ciqaabtiisana wax ka Celin Dambilayaasha ma jiro, Yuhuudduna wataas Khyayaamada iyo Xumaanta la Joogtay.

Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Eebe ha Naclado Yuhuud, wuxuu ka Reebay Baruurta, markaasay Gadeen oo Cuneen lacagtii (Wixii laga Reebay Lacagtiisa). Al-Ancaam (146-147).

148. Waxay Odhan kuwii Gaaloobay Hadduu Eebe Doono maannaan Gaalowneen Annaga iyo Aabayowganno, waxna maannaan Xarrimneen, saasayna u Beeniyeen kuwii ka horreeyey

سَيَقُولُ الَّذِينَ أَشْرَكُوا لَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا
أَشْرَكْنَا وَلَا آبَاءَنَا وَلَا حَرَمْنَا مِنْ شَيْءٍ
كَذَلِكَ كَذَّبَ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ حَتَّى ذُوقُوا

intay ka Dhadhamiyaan Ciqaabtanna-da, waxaad dhahdaa Agtiinna Cilmi mayahay aad noo soo Bixisaan (Muujisaan) waxaan malo ahayn ma Raacaysaan waxaadna uun tihiin Beenaalayaal.

بِأَسْمَاءٍ قُلْ هَلْ عِنْدَكُمْ مِنْ عِلْمٍ فَتُخْرِجُوهُ لَنَا
إِنْ تَتَّبِعُونَ إِلَّا الظَّنَّ وَإِنْ أَنْتُمْ إِلَّا تَخْرُصُونَ ﴿١٤٨﴾

149. Waxaad Dhahdaa Eebaa iska leh Xujada Wayn, hadduu doonana wuu idin Hanuunin Lahaa dhammaan.

قُلْ لِلَّهِ الْحُجَّةُ الْبَلِيغَةُ فَلَوْ شَاءَ لَهَدَىٰكُمْ
أَجْمَعِينَ ﴿١٤٩﴾

150. Waxaad Dhahdaa keena Markhaatigiinna idiin Marag Furi in Eebe Reebay kan (aad Reebteen) hadday Marag Furaan ha marag Furin la Jirkooda, hana raacin hawada kuwa Beeniyey aayaadkannaga, kuwaan Rumaynin Aakhiro Iyaguna Eebahood waxbay la simaan.

قُلْ هَلْ مِنْكُمْ شُهَدَاءُ الَّذِينَ يَشْهَدُونَ أَنَّ اللَّهَ
حَرَّمَ هَذَا فَإِنْ شَهِدُوا فَلَا تَشْهَدُ مَعَهُمْ وَلَا تَتَّبِعِ
أَهْوَاءَ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَالَّذِينَ
لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ وَهُمْ يَرِئَهُمْ
يَعْدِلُونَ ﴿١٥٠﴾

Aayadhan waxay caddayn Muran iyo waxyaalo ay u Xujaysan waxa Xun oy Fali, iyagoo Sheegi in Eebe arko oo Raalli ka yahay, waana Xujooyin ay Sheegsheegi oon Qiimo lahayn, waana male iyo been raac, Eebaase iska leh Xujada iyo Xigmada Dhabta ah Cidduu Doonana Hanuunin, wax Marag ah oy u hayaan Xaalkaasna ma jiro, waana in laga Digtoonaado hawada kuwa Beeniyey Aayaadka Eebe, Kuwaan Aakhiro Rumayna waxay Eebe la simi waxyaalo kale, cidna Xaq uma leh inay sheegato in Xumaantiisa Eebe ka raalli yahay, Maxaa yeelay Eebe Caqli buu siiyey, jidkana wuu u Caddeeyey, saas darteed waa in Wanaagga la Raaco Xumaantana laga Leexdo oon sababo loo dyadayan, ma jirto sabab loo Cuskan Arrintaas, ee waa uun Xumaan iyo Shaydaan. Al-Ancaam (148-150).

151. Waxaad Dhahdaa Kaalaya aan idiin Akhriyo waxa Eebe idinka reebaye, waa inaydaan wax la Wadaajin, Labada waalidna waa inaad u samo Fashaan (oydaan Caasiyin) oydaan laynna Caruurtiinna Saboolnimo (Baahi) Annagaa idinka iyo Iyagaba Arzaa-qi, hana u Dhawaannina Xumaanta teeda muuqata iyo Teeda Qarsoonba, hana dilina Naftii Eebe Reebay in Xaq darro lagu Dilo, saasuuna Eebe idin fari inaad wax kastaan.

* قُلْ تَعَالَوْا أَتْلُ مَا حَرَّمَ رَبِّي كُفْرًا بِعِبَادَتِي
الَّتِي تَشْرِكُونَ بِهِ سَيِّئًا وَبِالْوَالِدِينَ إِحْسَانًا
وَلَا تَقْتُلُوا أَوْلَادَكُمْ مِنْ أَمَانِي نَحْنُ
نَرَزُّكُمْ وَإِيَّاهُمْ وَلَا تَقْرَبُوا الْفَوَاحِشَ
مَاطَهرَ مِنْهَا وَمَا بَطْنٌ وَلَا تَقْتُلُوا النَّفْسَ الَّتِي
حَرَّمَ اللَّهُ إِلَّا بِالْحَقِّ ذَٰلِكُمْ وَصَّوْكُمْ بِهِ
لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿١٥١﴾

152. Hana u Dhawaannina Xoolaha Agoonta si Fiican mooyee intay ka Gaadhaan Xoogooda, Dhammaystira-

وَلَا تَقْرَبُوا مَالَ الْيَتِيمِ إِلَّا بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ حَتَّىٰ يَبْلُغَ
أَشُدَّهُ. وَأَوْفُوا بِالْعَيْلِ وَالْمِيزَانَ بِالْقِسْطِ

na Miisidda iyo Miisaanka, si Caddaalada, Kuma Kallifno Nafi waxayna karin haddaad hadlaysaanna Caddaalad fala, Qaraababa ha ahaadee, oo-fiyana Ballanka Eebe, Sidaasaana Eebe idin faray inaad waantoowdaan.

لَا تُكْفِرُ بِنَفْسِكَ إِلَّا وَمَسَعَهَا إِذَا قُلْتُمْ قَاعِدُوا
وَلَوْ كُنَّا ذَا قُرْبَىٰ وَيَعْمَدُ اللَّهُ أَوْ فُؤَادًا لَكُم
وَصَلَّيْنَا بِهِ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿١٥٣﴾

153. Kaasina waa Jidkayga toosan ee Raaca, hana Raacina Wadiiqaha oo idin la kala Tago (Idinka leexiyo Jidka Eebe) Saasaana Eebe idin faray, inaad Dhawrsataan.

وَأَنَّ هَذَا صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ فَاتَّبِعُوهُ وَلَا تَتَّبِعُوا
السَّبِيلَ فَتَنَفَّرَ بِكُمُ عَنْ سَبِيلِهِ ذَلِكُمْ وَصَلَّيْنَا
بِهِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٥٤﴾

Ibnu Mascuud wuxuu yidhi: Ciddii Dooni inuu arko dardaarankii Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ee korkiisa shabaddiisu ku taallay ha akhriyo Aayadahan. Ibnu Cabbaasna Wuxuu yidhi: Suuradda Ancaam waxaa ku sugan Aayad Sugan oo Quraanka Hooyo u ah, wuxuuna Akhriyey Aayadahan. waxayna ka Digi Aayaduhu Gaalnimu, Waalidka oo la Xumeyo, Caruurto Baahi darteed la Laayo, Xumaanta oo loo Dhawaado wax Muuqda iyo wax qarsoon, Naf Xaq darra loo dilo, Xoolaha Agoonta oo loogu Dhawaado Xumaan Isagoon Qaangaadhin, Miisidda iyo Miisaanka oo la Nusqaamiyo, Caddaalad Xumo, Ballanka Eebe oon la Oogin, Jidka Shaydaanka oo la Raaco. waana Aayado la Yaab leh oo Kulmiyey Dardaaran wayn kana Digay Xumaan Badan, Jidka Eebe ee Toosanna waa Jidka Xaqa ah ee Quraanku fari, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuu Tusiyey Taasoo Caddayn in Jidka Xaqa ah mid kaliya yahay, Waddooyin badan oo Shaydaan ugu Yeedhina Jiraan, oy Waajibtahay in laga Digtoonaado. Al-Ancaam (151-153).

154. Waxaanna Siinnay Nabi Muuse Kitaabkii (Tawreed) Annagoo Dhammaystiri waxa wanaagsan, wax walbana Caddayn, Isagoo hanuun iyo Naxariis ah, inay la kulanka Eebahood Ru-meeyaan.

ثُمَّ آتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ تَمَامًا عَلَى الَّذِي
أَحْسَنَ وَتَفْصِيلًا لِكُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً
لَعَلَّهُمْ يَلْقَاءَ رَبَّهُمْ بِؤْمُونٍ ﴿١٥٤﴾

155. Kanna (Quraanku) waa Kitaab aan soo Dejinnay oo Barakaysan, ee Raaca, Dhawrsadana in laydiin Naxariisto.

وَهَذَا كِتَابٌ أَنْزَلْنَاهُ مُبَارَكٌ فَاتَّبِعُوهُ وَاتَّقُوا
لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١٥٥﴾

156. Oydaan Dhihin waxaa uun Kitaab lagu soo Dejiyey Labadii qolo ee naga horreeyey, annaguna ma naqaanno Cilmigoodii.

أَنْ تَقُولُوا إِنَّمَا أَنْزَلَ عَلَيْنَا الْكِتَابَ عَلَى طَائِفَتَيْنِ مِنْ قَبْلِنَا
وَإِنْ كُنَّا عَنْ دِرَاسَتِهِمْ لَغَافِلِينَ ﴿١٥٦﴾

157. Ama aydaan dhihin haddii Nalagu soo Dejiyo Kitaab waxaan ahaan lahayn kuwo ka hanuunsan iyaga, waxaa idiinka yimid Xujo (Cad) xagga Eebi-

أَوْ تَقُولُوا لَوْلَا أَنْزَلَ عَلَيْنَا الْكِتَابَ لَكُنَّا
أَهْدَىٰ مِنْهُمْ فَقَدْ جَاءَكُمْ بَيِّنَةٌ مِنْ رَبِّكُمْ

hiin, iyo Hanuun, iyo Naxariis, cid ka dulmi badanna ma jirto mid beenisay Aayaadka Eebe oo ka Jeedsatay, waxaannu ku Abaal marin kuwa ka Jeedsada aayaadkannaga Cadaab Xun Jeedsigooda dartiis.

وَهْدَىٰ وَرَحْمَةً مِّنْ أَظْفَرٍ مِّمَّنْ كَذَّبَ بِآيَاتِ اللَّهِ
وَصَدَفَ عَنْهَا سَجَرَىٰ الذِّبْنِ يَصْدُقُونَ عَنْ آيَاتِنَا
سُوءَ الْعَذَابِ بِمَا كَانُوا يَصْدُقُونَ ﴿١٥٧﴾

Halkan Eebe wuxuu ku Sheegay Ammaanta Tawreed iyo Kitaabka Quraanka ah ee Barakaysan, oy waajibtahay in la Raaco, lana Dhawrsado si Naxariista Eebe loo Muto, Aayadaha kalana waxay Caddayn in Quraanka la soo Dejiyey si aan loo Calaacalin, oon loo Dhihin Kuwii naga Horreeyey waxaa la siiyey Kitaab anagana wax ma naqaanno, ama ayna u Dhihin haddii Kitaab nalagu soo Dejiyo annagaa ka hanuunsanaan lahayn, markaasuu Eebe u Sheegay in Xujo iyo Hanuun Eebe u Yimid iyo Naxariis, cid ka Dulmi badanna uusan jirin Ruux teeniyey Aayaadka Eebe oo ka Jeedsaday, waxaana lagu abaal marin Kuwaas Cadaab Xun, Jeedsigooda dartiis. Aayaduhuna waxay caddayn inaan Cidna Xujo u Haysan Beeninta Xaqa Illeen Kitaab Xaq ah oo wax walba Caddeeyey yaa Eebe u soo Dejiyey, kaasoo Mudan in la Raaco oo lagu Dhaqmo, Looguna Yeedho Wanaaggiisa. Al-Ancaam (154-157).

158. Ma waxay Sugayaan in malaa'igtu u timaado, ama Alle u yimaado ama u Yimaaddaan Aayadaha Eebahaa Qaarkood Maalintay u Imaan Aayadaha Eebahaa qaarkood wax uma tarto Naf rumayn iyadoon horay u Rumayn ama aan ku Kasban iimankeeda Khayr, waxaad Dhahdaa suga Anaguna waanu Sugaynaa.

هَلْ يَنْظُرُونَ إِلَّا أَنْ تَأْتِيَهُمُ الْمَلَائِكَةُ أَوْ يَأْتِيَ رَبُّكَ
أَوْ يَأْتِيَ بَعْضُ آيَاتِ رَبِّكَ لِيُذِيقَهُمْ
لَذِيذَ نَفْسٍ أَوْ يَمَسُّهُمُ لُزُومٌ أَمْ مَن مِّنْ قَبْلِ
أَوْ كَسَبَتْ فِي إِيمَانِهَا خَيْرًا قُلْ انظُرُوا
إِنَّمَا تُنظُرُونَ ﴿١٥٨﴾

159. Kuwa ku kala tagay Diintooda oo noqday Kooxo, ka mid ma tihid, Amarkoodana Eebe umbaa iska leh, markaasuu uga warrami waxay Falayeen.

إِنَّ الَّذِينَ فَتَرُوا دِينَهُمْ وَكَانُوا شِعْمًا آسَتَ مِنْهُمْ فِي
شَيْءٍ إِنَّمَا أَمْرُهُمْ إِلَى اللَّهِ ثُمَّ يُنَبِّئُهُمْ بِمَا كَانُوا
يَفْعَلُونَ ﴿١٥٩﴾

160. Ciddii la timaadda Wanaag wuxuu mudan Toban la mid ah, Ciddii la Timaaadda Xumaanna waxaa laga abaal mariyaa mid la mid ah, lamana Dulmiyo.

مَنْ جَاءَ بِالْحَسَنَةِ فَلَهُ عَشْرُ مَثَلٍ هَاتَا وَمَنْ جَاءَ
بِالسَّيِّئَةِ فَلَا يُجْزَىٰ إِلَّا مِثْلَهَا وَهُوَ لَا يُلْظَمُونَ ﴿١٦٠﴾

Halkan wuxuu Eebe ugu Goodiyi Gaalada Xaqa Beenisay, Maalintay imaanayaan aayadaha Alle qaarkood, (waana qorraxdoo galbeed ka soo baxda), wax Rumayna oo laga aqbalu ma jirto, Haddaan horay xaqa loo Rumeyn, ama Khayr horay loo kasban, ha sugeen Gaaladu Muslimiintuna way sugiye, Kuwa ku kala tagay Diintana Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korikiisa ha yeelee) Waxba kama Dhexeeyo, Amarkoodana Eebaa iska leh, Aayadduna waxay ka Digi Ku kala Tagga diinta iyo Iskhilaafka mar hadduu Xaqu Cadyahay mid kaliyana yahay, waana ka Nabiga lagu Khatimay Nabiyadii horana haysteen.

Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Haddaan Nabiyada nahay

Diintanadu waa mid kaliya. kala Tag, Iskhilaaf, iyo Kooxo Kooxana ma Oggola Diinta Islaamku, Eebe waa Kali Dadkuna waa Addoomadiisa Xaquuna waa mid markaas maxaa loo kala Tegi. Tan kale Cidii Wanaag fasha waa loo Toban Laabi, Xumaantuna waa hal kaliya, cid la Dulminna ma jirto, Taasina waa Naxariista Eebe iyo Fadligiisa uu u Naxariisan Addoomadiisa Illeen waa Naxariistee. Al-Ancaam (158-160).

161. Waxaad Dhahdaa wuxuu Igu Hanuuniyey Eebahay Jid Toosan Diin Sugan oo ah Diintii (Nabi) Ibraahim, isagoo toosan, oon gaalada ka mid ahayn.

قُلْ إِنِّي هَدَىٰ رَبِّيَ إِلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ دِينًا قِسَمًا
مِّلَّةَ إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا وَمَا كَانَتْ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿١٦١﴾

162. Waxaad Dhahdaa Salaaddayda, waxaan Gawrici, Noloshayda iyo Geeridaydaba Eebaa iska leh, Eebaha Caalamka ah.

قُلْ إِن صَلَاتِي وَنُسُكِي وَمَحْيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ
الْعَالَمِينَ ﴿١٦٢﴾

163. Wax la Wadaagana ma jiro (arri-mahaas), Saasaana lay faray Anigaana ugu horreeya Muslimiinta (Ummad-dan).

لَا تَشْرِكْ لَهُ، وَبِذَلِكَ أُمِرْتُ وَأَنَا أَوَّلُ الْمَسْلُومِينَ ﴿١٦٣﴾

164. Waxaad Dhahdaa ma wax ilaah ka soo hadhay yaan Eebe ka dooni (Dhi-gan) Isagoo Ilaahay wax walba Eebe u ah, naf kastana waxay kasbato waa uun Korkeeda, Nafna Dambi naf kale ma Qaaddo, Xagga Eebihiiin umbaana lay-diin Celin, wuxuuna idiinka warrami waxaad isku Diidanaydeen.

قُلْ اعْبُدُوا اللَّهَ أُنْبِيَ رَبِّيَ وَهُوَ رَبُّ كُلِّ شَيْءٍ وَلَا
تَكْسِبُ كُلُّ نَفْسٍ إِلاَّ عَمَلَهَا وَلَا تَنْزُدُ وَازِرَةٌ وَّرَدٌّ
أُخْرَىٰ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمْ مَرْجِعُكُمْ فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنتُمْ فِيهِ
تَخْتَلِفُونَ ﴿١٦٤﴾

165. Eebana waa kan idinka Yeelay kuwo Dhulka u Hadhay, Qaarkiinna qaar ka sara mariyey Darajooyin, inuu idinku Imtixaamo wuxuu idin siiyay, Eebana waa Deg degtaa Ciqaabtiisu waana Dambi Dhaafe Naxariista.

وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمْ خَلْقَ الْأَرْضِ وَرَفَعَ بَعْضَكُمْ
فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَاتٍ لِّيَسْأَلُوكُم فِي مَاءِ انْتِكُمْ إِنْ رَبُّكُمْ
سَرِيعُ الْعِقَابِ وَإِنَّهُ لَعَلْمُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٦٥﴾

Halkanna wuxuu Eebe faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Sheego Inuu ku Toosanyahay Diin Fiican oon Qallooc lahayn, oo ah Diintii Nabi Ibraahimkii Toosnaa, iyo Salaadda Camalka iyo Gawraca, Noloshooda iyo Geeridoodaba Eebe iska leeyahay ee wax lawadaagaa uusan Jirin, Nabiguna waa Imaamka Ummaddan iyo Mu'miniinta oo dhan, waxaan Eebe ahayna Eebe lagama Dhigto Illeen isagaa wax walba Eebe u ahe. Naf walbana waxay kasbatay iyadaa ka masuula, Nafna Naf kale Dambigeeda ma Qaaddo, Dhammaanna Eebaa loo Noqon, Caddayna wixii laysku Diidanaa, waana kan inaga yeelay kuwa Camira Dhulka oo ku Noolaada, kalana Duway Dadka oo ka yeelay mid Cilmi leh, Mid Jaahil ah, mid Xoola leh, mid saboola, Mid Eebe ka Yaabi, mid kale iyo wax la mida, Imtixaan Dartiis. Eebana waa Deg degtaa Ciqaabtiisu waana Dambi Dhaafe Naxariista, Suuradduna waxay ku dhammaatay Cabsi galin iyo Rajo galin oo ah sida quraanka ku badan, si aan laysu Illoobin, ama looga Quusanin Naxariista Eebe. Al-Ancaam (161-165).

Suurat Al-Acraaf

سُورَةُ الْأَعْرَافِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Waxay ku Tusin Mucjisad Quraanka).

الْمَصِّ ۝

2. Kani waa Kitaab aannu kuu soo Dejinnay ee yeyna Laabtaada Dhibi (Cidhiidh) ahaan inaad ugu Digto, waana Waanada Mu'miniinta.

كُتِبَ أَنْزِلَ إِلَيْكَ فَإِنْ كُنَ فِي صَدْرِكَ حَرَجٌ مِنْهُ
لِيُنذِرْ بِهِ وَذِكْرَى لِلْمُؤْمِنِينَ ۝١

3. Raaca waxa Laydiinka soo Dejiyey Xagga Eebe, hana Raacina wax ka soo hadhay oo Awliyo ah (Gargaara ah) yaraana intaad Waantoobaysaan.

أَتَعْمُوا مَا أَنْزَلَ إِلَيْكُمْ مِنَ رَبِّكُمْ وَلَا تَتَّبِعُوا مِنْ دُونِهِ
أَوْلِيَاءَ قَلِيلًا مِمَّا تَدَّكَّرُونَ ۝٢

4. Badanaa Intaan Magaalo Halaagnay oo u Timid Ciqaabtanadii iyadoo Jiifta (Habeen) ama Qayluushan (Maalin).

وَكُرْهُنَّ قَرْيَةً أَهْلَكُنَّهَا فَجَاءَهَا بِأَسْنَانِيَّتًا
أَوْهَرٌ قَابِلُونَ ۝٣

5. Baryadoodu (Qayladdooduna) markuu u Yimid halaagganagu ma ahayn waxaan ahayn inay Dhahaan annagaa daalimiin ahayn.

فَمَا كَانَ دَعْوَاهُمْ إِذْ جَاءَهُمْ بِأَسْنَانًا إِلَّا أَنْ قَالُوا
إِنَّا كُنَّا ظَالِمِينَ ۝٤

6. Waana Warsanaynaa kuwii loo Diray (Ummadihii waxay ku Jawaabeen) waana warsanaynaa kuwii la Diray (Rasuulladii inay Gaadhsiiyeen).

فَلَمَّا سَأَلْنَا الَّذِينَ أُرْسِلُوا إِلَيْهِمْ وَلَمْ يَسْأَلْنَا
الْمُرْسَلِينَ ۝٥

7. Waana uga Warramaynaa Ogaansho, mana aannaan ka Maqnayn.

فَلَمَّا قَضَيْنَا عَلَيْهِمُ بَعْدَهُمْ وَمَا كُنَّا عَلَيْهِمْ بِمُؤَدِّينَ ۝٦

Kitaabka Quraanka ah waa Kitaab Xaq ah oo Nabiga lagu soo Dejiyey si uu dadka ugu digo, mana aha inuu Cidhiidhi ku galo, waana Waanada Mu'miniinta, waana in la Raaco Quraankan Eebe soo Dejiyey.

mana aha in la Raaco Xukun Eebe Xukunkiisa ka soo hadhay, wax waano qaadanna waa yar yahay. Immisaa la halaagay Magaalo Goor Habebna ama Maalin, Markaasna ku Qaylyeen inay Daalimiin ahaayeen, Eebana wuu warsan Umadaha waxay ugu Jawaabeen Nabiyada, Rasuulladana waxaa la warsan inay Gaadhsiiyeen Xaqii, Eebana wax walba waa Qgyahay wax ka Qarsoonna ma jiro Illeen Eebe inagama maqnee, Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dhammaantiin waxaad tihiin Ilaaliye Dhammaantiinna waa laydin warsan. Al-Acraaf (1-7).

8. Miisaanku waa Xaq Maalintaas (Qiyaamada) Cidday Cuslaato Miisaankiisa (Fiican) Kuwaasu waa uun kuwa Liibaanay.

وَأَلْوَزٌ يَقْوِيذُ الْحَقَّ فَمَنْ ثَقَلَتْ مَوَازِينُهُ
فَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿٨﴾

9. Cidduu Fududaado Miisaankiisuna kuwaasuna waa kuwa Khasariyey Naftooda, Dulmigay ku Falayeen Aayaadkanaga Dartiis.

وَمَنْ حَفَّتْ مَوَازِينُهُ فَأُولَئِكَ الَّذِينَ خَسِرُوا
أَنفُسَهُمْ بِمَا كَانُوا بِآيَاتِنَا يَظَاهُونَ ﴿٩﴾

10. Waxaan idin Makaninay Dhulka, waxaana idiinka Yeellay Meel lagu Noolaado, waxaase yar Intaad Shukriyeysaan.

وَلَقَدْ مَكَّنَّاكُمْ فِي الْأَرْضِ وَجَعَلْنَا لَكُمْ فِيهَا
مَعَادِينَ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ﴿١٠﴾

11. Waan idin Abuurray (Nabi Aadan) waana idin Suuraynay, markaasaan ku nidhi Malaa'igta u Sujuuda (Nabi) Adam (Salaan) wayna Sujuudeen, Iblisse kama mid ahayn kuwa Sujuuda.

وَلَقَدْ خَلَقْنَاكُمْ فُرُشُورًا نَكَّرْنَا ثُمَّ قُلْنَا
لِلْمَلَأِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ
لَمْ يَكُنْ مِنَ السَّاجِدِينَ ﴿١١﴾

12. Wuxuu Yidhi (Eebe) maxaa kaa reebay inaad Sujuuddo markaan ku faray, wuxuu Yidhi anaa ka Khayr roon, waxaad iga Abuurtay Dab isagana waxaad ka Abuurtay Dhoobo.

قَالَ مَا مَنَّكَ عَلَى اسْتَسْجِدَ إِذْ أَمَرْتُكَ قَالَ أَنَا خَيْرٌ مِنْهُ
خَلَقْتَنِي مِنْ نَارٍ وَخَلَقْتَهُ مِنْ طِينٍ ﴿١٢﴾

Eebe wa Caadil, wuxuuna oogi Qiyaamada Miisaan Xaq ah, Ciddii khayrkeedu badnaadana waa Liibaantay, tii Khayrkeedu Yaraadana way Khasaartay Isagaana Dulmi falay, markaasuu Eebe Xusuusiyey Addoomadiisa siduu ugu Nicmeeyey, Dhulkana ugu Sugay una Makaniyey, wayse Shukri yarihiin, markaasuu haddana Xusuusiyey siduu u Sharifay Aabahood Nabi Aadam, Malaa'igtana u faray inay Qaddariso, wayna Yeeleen oo Faleen wuxuu Eebe faray, Iblisse isagu wuu Diiday inuu waynecyo Nabi Aadam, wuuna Xasday wuxuuna Sheegay inuu isagu ka Fiicanyahay, Illeen Dabbaa laga Abuuray, Nabi Aadamna Dhoobe, waana Qiyaas beena oo Xun.

Cid kastoo Nasab, Dhalasho, iyo Asal si Xun ugu Faanta oo Xaq ka Diidana Iblisbaa Bare iyo Hogaamiye u ah, dadkuna waxay ku kala Fiicanyihiin Eebe ka Yaabid, Wanaaga, Sharafta iyo Akhlaaqda Fiican ee wax tarka ah Mase aha waxaan ahay Hebel. Al-Acraaf (8-12).

13. Wuxuu Yidhi (Eebe) ka Dega Xageeda (Jannada) Xaq uma lihid

قَالَ فَاهْطِ وَمِنْهَا فَمَا يَكُونُ لَكَ أَنْ تَتَكَبَّرَ فِيهَا فَاخْرُجْ

inaad isku Dhex Kibriside, Bax waxaad ka mid tahay kuwa Dullaysane.

إِنَّكَ مِنَ الصَّغِيرِينَ ﴿١٣﴾

14. Wuxuu Yidhi ii sug tan iyo Maa-linta la soo Bixin.

قَالَ أَنْظِرْنِي إِلَى يَوْمِ يُبْعَثُونَ ﴿١٤﴾

15. Wuxuu Yidhi (Eebe) Waxaad ka mid tahay kuwa la sugi.

قَالَ إِنَّكَ مِنَ الْمُنظَرِينَ ﴿١٥﴾

16. Wuxuu Yidhi I baadiyeyntaada Darteed waxaan u Fadhiisan Jidkaaga Toosan (waan Dhumin).

قَالَ فِيمَا أُعُوذُ بِنِي لَأَقْعُدَنَّ لَهُمْ صِرَاطَكَ الْمُسْتَقِيمَ ﴿١٦﴾

17. Waxaanna kaga iman hortooda, Gadaashooda, Midigta iyo Bidixda mana helaysid badankooda oo Shu-griyi.

لَوْلَا دِينُكُمْ مِثْلُ بَيْنِ أَيْدِيهِمْ وَمِنْ خَلْفِهِمْ وَعَنْ أَيْمَانِهِمْ وَعَنْ شَمَائِلِهِمْ وَلَا تَجِدُ أَكْثَرَهُمْ شَاكِرِينَ ﴿١٧﴾

18. Wuxuu Yidhi Eebe ka bax Xaggeeda adoo Caayan oo la Dheereeyey, Ciddii ku raacdana waxaa laga Buuxin Jahannamo Dhammaantiin.

قَالَ أَخْرَجْنَاهُم مِّنْهَا مَذْمُومًا مَّاذُومًا لِّمَن تَبِعَكَ مِنْهُمْ لَأَمْلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنْكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿١٨﴾

Eebe wuxuu Amray Iblis inuu ka Baxo Jannada Eebe agteeda, Illeen kuma Habboona Eebe agtiisa isku Kibrine, wuxuuna faray inuu baxo Isagoo Dullaysan, wuxuuse Eebe Warsaday in la Sugo tan iyo Qiyaamada, wuxuuna u Ballanqaaday in la Sugi tan iyo Maalintaas, wuxuuna ku Dhaartay Iblis inuu Dhumiyo Dadka kana Leexiyo Jidka Toosan, Dhan walbana uga imaan, una qurxin adduunka, wuxuuna Eebe ugu Jawaabay Bax Adoo Ceeb leh oo Caayan lana Fogeeyey, Jahannamana laydinka Buuxin adiga iyo inta ku Racdaba.

Ibliisna saasu col ugu yahay Dadka ayna Waajibtahay in laga Digtoonaado. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee) Wuxuu Yidhi: Shaydaan wuxuu u Fadhiistay Dadka Jidka wuxuuna ka Reebay Islaamidda. Hijrada, iyo Jahaadka wayna Khilaafeen oo Faleen Khayrki Ciddii saas Yeesha oo si kasta u Dhimata Jannaday Gali. Waxaana wariyey Imaamu Axmed. Al-Acraaf (13-18).

19. Nabi Adamow Dega Adiga iyo Haweenaydaadu Jannada, kana Cuna Meeshaad Doontaan, hana u Dha-waannina Geedkan, ood Noqotaan Daalimiin.

وَيَقَادِمُ أَسْكُنُ أَنْتَ وَرَوْحُكَ الْجَنَّةَ فَكَلَّا مِنْ حَيْثُ شِئْتُمَا وَلَا تَقْرَبَا هَذِهِ الشَّجَرَةَ فَتَكُونَا مِنَ الظَّالِمِينَ ﴿١٩﴾

20. Waxaana Waswaasiyey Shaydaan, inuu ka Muujiyo Xaggooda wixii laga Asturay oo Cawradooda ah, wuxuuna Yidhi wuxuu idinka Reebay Eebe Geedkan inaydaan Noqonin Malaa'ig, ama aydaan Waarin.

فَوَسَّسَ لَهُمَا الشَّيْطَانُ لِيُبْدِيَ لَهُمَا مَا وُورِيَ عَنْهُمَا مِنْ سَوْءِ أَيْهَمَا وَقَالَ مَا نَهَاكُمَا رَبُّكُمَا عَنْ هَذِهِ الشَّجَرَةِ إِلَّا أَنْ تَكُونَا مَلَكَتَيْنِ أَوْ تَكُونَا مِنَ الْفَالِسِينَ ﴿٢٠﴾

21. Wuxuuna ugu Dhaartay inaan idiin ahay Naseex.

وَقَالَ لَهُمَا إِيَّيْكُمْ مِنَ التَّوْحِيدِ ﴿٢١﴾

22. Wuuna soo Dejiyey Dhagar Dar-teed, markay Dhadhamiyeen Geedka waxaa u Muuqday Xumaantooda waxayna ahaayeen kuwo isku Dhadhajiya Calcanta Jannada waxaana u Yeedhay Eebahood Miyaannan idinka reebin Geeddan, oonnan Idinku odhan Shay-daanku wuxuu idiin yahay Col Cad.

فَدَلَّهُمَا بِعُرْوَةٍ فَلَمَّا دَاقَا الشَّجْرَةَ بَدَتْ لَهُمَا
سَوْءُهُمَا وَطَفِقَا مَخْحَصِمَانِ عَلَيْهِمَا مِنْ وَرَقِ الْجِنَّةِ
وَتَادَهُمَا رَبُّهُمَا الزُّلْفَهُمَا عَنْ تِلْكَ الشَّجْرَةِ وَأَقْلَبَ
لَهُمَا إِنْ الشَّيْطَانَ لَكُمْ عَدُوًّا مُبِينًا ﴿٢٢﴾

23. Waxayna Dheheen Eebow waxaan Dulminay Naftannada Haddaadan noo Dambi Dhaafin oodan noo Naxariisan-na waxaan ahaanaynaa kuwo Khasaa-ray.

فَالَّذِينَ ظَلَمُوا أَنْفُسَهُمْ وَإِنْ لَمْ تَفْقَرْنَا وَتَرَحَّمْنَا
لَنَكُونَنَّ مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٢٣﴾

Ilaaheen wuxuu ina Xusuusin siduu ugu Nicmeeyey Aadam iyo Xaawo, Jannadana u Dejiyey, una banneeyey inay Nicmadeeda Cunaan marka laga Reebeo hal Geed, waxaase Kasday Shaydaan, Wuuna Khayaamay isagoo u Dhaartay inuu Nasteex u Yahay, markay Geedkii wax ka Cuncenna Darajadii ka Dhacday, Cawradiina Muuqatay, Eebana Xusuusiyeey inuu Shaydaan uga Digay una Caddeeyey inuu Col idiin yahay, markaasay Calaacaleen oo Qirteen Gafkoodii Eebana Naxariis warsadeen, Taasina waxay ku Tusin Tabar yarida Dadka iyo Khaldami ogiddiisa, iyo wax badso Jacaylka, inkastoo loo Nicmeeyo, iyo Colnimada Iblis iyo Khayaamadiisa, iyo in laga Digtoonaado Cid kasta oo Nasteex iska Dhigi haba Dhaartee, Illeen Cid kastoo Dhaaratay Run ma sheegaysee, iyo in Dambigu Ceebta Muujin, Kuna Kashifi, waase in Eebe la Magan galo, laguna Xidhnaado. Al-Acraaf (19-23).

24. Wuxuu Yidhi Eebe ka dega Qaar-kiin Qaarbuu Col u yahaye, waxaana Dhulka idiinku Sugaan Nagaadi iyo Raaxo tan iyo Muddo.

قَالَ أَهَاطُوا بَعْضُكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوًّا وَلَكُمْ فِي الْأَرْضِ
مُسْتَقَرٌّ وَمَنْعٌ إِلَىٰ حِينٍ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuuna Yidhi Eebe Dhexdiisaad ku Noolaanaysaan Dhexdiisaana ku Dhimanaysaan Xaggiisaana laydinka soo Bixin.

قَالَ فِيهَا تَحْيَوْنَ وَفِيهَا تَمُوتُونَ وَفِيهَا
تُخْرَجُونَ ﴿٢٥﴾

26. Bani Adamow waxaan idiin soo Dejinay Dhar Astura Xumaantiinna (Cawrada) iyo Labbis (Xarrago) Dharka Dhawrsashada yaase Khayr roon, Kaasina waa Aayaadka Eebe inay Dadku wax Xusuustaan.

يَسْبِيءُ آدَمَ قَدْ أَنْزَلْنَا عَلَيْكَ لِبَاسًا يُورِي سَوْءَ تَكْوُرِكَ
وَرِيئًا وَلِبَاسٍ الْتَقَوَىٰ ذَلِكَ خَيْرٌ ذَلِكَ مِنَ آيَاتِ
اللَّهِ لَعَلَّهُمْ يَذَّكَّرُونَ ﴿٢٦﴾

27. Bani Adamow Yuusan idin Fid-nayn Shaydaan siduu uga soo Bixiyey Labadiinii Waalid Jannada, isagoo ka siibi Dharkoodii inuu Tusiyo Xumaan-

يَسْبِيءُ آدَمَ لَا يَفْتِنَنَّكَ الشَّيْطَانُ كَمَا أَخْرَجَ
آبَوَيْكَ مِنَ الْجَنَّةِ يَتَزَعُّ مِنْهُمَا لِبَاسَهُمَا لِيُرِيَهُمَا

tooda (Cawrada) wuu idin Arkaa isaga iyo Colkiisu idinkuse ma aragtaan, waxaana uga Yeellay Shaydaanka Sokeeya kuwaan Rumeynin Xaqa.

سَوَاءٌ لَّهُمَا آتَاءُهُمْ بِرَبِّكَ هُمْ وَوَقِيلُهُمْ مَنْ حَيْثُ
لَا تَرْوَهُمْ إِنَّا جَعَلْنَا الشَّيَاطِينَ أَوْلِيَاءَ لِلَّذِينَ
لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٧﴾

Wuxuu faray Eebe inay ka Baxaan Jannada iyagoo qaarkood qaar Col u Yahay, Iyagoo Dhulka ku Nagaan tan iyo Muddo, oy kuna Noolaan Dhexdiisa kuna Dhiman lagana soo Bixin, markaasuu Eebe uga warramay Dadka wuxuu ugu Nicmeeyey oo Dhar ay isku Asturaana iyo mid Xarrago, waxaase ka Khayr roon Dhawrsoonida si ay u Xusuustaan, wuxuuna uga Digay inuu Fidmeeyo Shaydaanku siduu Waalidkood Aadam iyo Xaawa uga saaray Jannada, isagoo ka Siibay Dharkoodii, waxaana jira inuu Shaydaanku u Jeedo Dadka iyaguse ayan arkayn, Shaydaankuna wuxuu Saaxiib la yahay kuwaan Rumaynin Xaqa. Waxayna Aayaduhu Caddayn siduu Shaydaan Dadka Col ugu yahay, iyo inay ka Digtoonaadaan, iyo inay Xusuustaan sida Eebe u Arrad Bixiyey uguna soo Dejiyey Dhar ay isku Asturaan, Waxaase Muuqda in Dadka qaarkiis Jecelyahay isqaawinta, sida kuwa Dharka Gaabsaday iyo kuwa Xidhay Dharka Khafiifka ah ee aan wax asturayn, Taasoo ku tusin inta Diidday Shukriga Nicmada Eebe. Al-Acraaf (24-27).

28. Markay Falaan Xumaanna waxay Dhahaan waxaan ka Hellay Aabayaalkanno Eebaana na faray iyada, waxaad Dhahdaa Eebe ma faro Xumaan ma waxaad ku Dhahaysaan Eebe waxaydaan Ogayn.

وَإِذَا قَعَلُوا فَحْشَةً قَالُوا وَجَدْنَا عَلَيْهَا آيَاتِنَا وَآلِهَةً
أَمَرْنَا بِهَا قُلْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَأْمُرُ بِالْفَحْشَةِ أَتَقُولُونَ عَلَى
اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٢٨﴾

29. Waxaad Dhahdaa wuxuu faraa Eebe Cadaaladda iyo inaad u Jeedisaan Wajigiinna (Xaggiisa) Masaajidkasta Agtiisa, baryana idinkoo u kaliyeeli Diinta siduu idinku Billaabay Yaad ku soo Noqonaysaan.

قُلْ أَمَرَ رَبِّي بِالْقِسْطِ وَأَقِيمُوا وُجُوهَكُمْ عِندَ كُلِّ
مَسْجِدٍ وَادْعُوهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ كَمَا بَدَأَكُمْ
تَعُودُونَ ﴿٢٩﴾

30. Koox wuu Hanuuniyey, Kooxna waxaa ku sugnaaday korkooda Baadi, maxaa yeelay waxay ka Yeesheen Shayaadiinta Awliyo, waxayna u Malayn inay hanuunsanyihiin.

فَرِيقًا هَدَىٰ وَفَرِيقًا حَقَّ عَلَيْهِمُ الضَّلَالَةُ إِنَّهُمْ
اتَّخَذُوا الشَّيَاطِينَ أَوْلِيَاءَ مِن دُونِ اللَّهِ وَيَحْسَبُونَ
أَنََّّهُمْ مُهْتَدُونَ ﴿٣٠﴾

Waxaana wax lala yaaba ah in Markay Gaaladu Xumaan falaan Sheegaan inay Aabayaalkood ka soo gaadheen, Eebana faray Sidaas, Eebase ma faro Xumaan, mana haboona in Eebe lagu been abuurto. Eebese wuxuu Faraa Cadaaladda, Salaad Dar Eebe ah, waxaana jirta inuu Eebe Dadka u soo Celin siduu ku Billaabay, Eebe wuxuu hanuuniyaa qaar, qaarna way dhumaan, Maxaa yeelay Shaydaan yey Sokeeye ka Yeesheen Eebe ka sokow iyagoo isu Malayn inay Hanuunsanyihiin, mana habbona in Cidna Xumaanta lagu Raaco ama Aabbo ha ahaado ama Cid kale ha ahaatee.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dadow waxaa laydiin soo Kulmin Eebe Idinkoo Kaba la', Qaawan, oon Gudnayn, Eebaa Yidhi: Saan ku Billownay yaan ku soo Celinaynaa (Bukhaari iyo Muslim). Al-Acraaf (28-30).

31. Bani Adamow qaata Quruxdiinna (Dharka) Masaajid kasta agtiisa, Cuna oo Cabbana hana xad gudbina Illeen Eebe ma Jecla kuwa xadgudubee.

* بَنِي آدَمَ خُذُوا زِينَتَكُمْ عِندَ كُلِّ مَسْجِدٍ وَكُلُوا
وَأَشْرَبُوا وَلَا تُسْرِفُوا إِنَّهُ لَا يُحِبُّ الْمُسْرِفِينَ ﴿٣١﴾

32. Waxaadna Dhahdaa yaa Reebyay Quruxdii Eebe u soo Bixiyey Addoomadiisa, iyo Wanaagga Rizqiga ah, waxaad Dhahdaa waxaa iska leh kuwa Rumeeyey Noloshu Adduunyo Dhexdeeda, Gaarna u tahay Maalinta Qiyaame, saasaanna ugu Caddaynay Aayaadkannaga Ciddii wax Og.

قُلْ مَنْ حَرَّمَ زِينَةَ اللَّهِ الَّتِي أَخْرَجَ لِعِبَادِهِ وَالطَّيِّبَاتِ
مِنَ الرِّزْقِ قُلْ هِيَ لِلَّذِينَ آمَنُوا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا
خَالِصَةٌ يَوْمَ الْقِيَامَةِ كَذَلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ
لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٣٢﴾

33. Waxaad dhahdaa wuxuu uun Xarrimay Eebahay waxa Xun kan Muuqda iyo ka Qarsoonba, iyo Dambiga, iyo Xad Gudub Xaq darro iyo inaad la wadaajisaan Eebe wuxuusan Xujo u soo Dejinin, iyo inaad ku Sheegtaan Eebe waxaydaan Ogayn «Xaqnimadiisa».

قُلْ إِنَّمَا حَرَّمَ رَبِّي الْفَوَاحِشَ مَا ظَهَرَ مِنْهَا وَمَا بَطَّنَ
وَالْأَنفُسَ الَّتِي بَغَى عَلَيْهَا وَأَن تَشْرَكُوا بِاللَّهِ
مَا لَمْ يُزَلِّ بِهِ سُلْطَانًا وَأَن تَقُولُوا عَلَى اللَّهِ مَا
لَا تَعْلَمُونَ ﴿٣٣﴾

Waa in Cawrada la Asturo Marka la Cibaadaysan iyo mar walba, waxna la Cuno lana Cabbo Isagoon la Xadgudbayn, Illeen Eebe ma Jecla kuwa Xadgudbee, cid Xarrimi kartana ma jirto Quruxda iyo Wanaaga Rizqiga ah ee Eebe u soo Saaray Dadka, Wanaaga way mudantahay Mu'miniinta Adduunka, Gaarbayna u tahay Qiyaamada, Saasuuna Eebe ugu Caddeeyey aayaadkiisa Ciddii wax kasi, Eebe wuxuu Xarrimaa Xumaanta mid Muuqata iyo mid qarsoonba iyo Dambiga, iyo Dulmigaa Xaq Darro iyo in Eebe lala wadaajiso waxaan Xujo lahayn iyo in Lagu sheego Eebe waxaan loo Cilmi lahayn. Aayaduhuna waxay ku Tusin in Wanaaggana la falo Xumaantana laga Fogaado. Al-Acraaf (31-33).

34. Ummadkasta waxaa u sugnaaday Ajal (Muddo) markay Timaaddo Ajashuna kama dibmaraan Saacad kamana hor maraan.

وَلِكُلِّ أُمَّةٍ أَجَلٌ فَإِذَا جَاءَ أَجَلُهُمْ لَا يَسْتَأْخِرُونَ
سَاعَةً وَلَا يَسْتَقْدِمُونَ ﴿٣٤﴾

35. Bani Adamow hadday idiin yiimaadaan Rasuullo idinka mida oo idiinka warrama Aayaadkayga Ciddiise Dhawrsata oo Wanaag Fasha, Cabsi ma Saarra mana Walbahaaraan.

بَنِي آدَمَ إِنَّمَا أَنزَلْنَا الذِّكْرَ رُسُلًا مِنْكَ يُقْرَأُ عَلَيْكَ بِآيَاتِ
رَبِّكَ تُقْرَأُ وَأَنْتَ تَكْتُمُ الصَّحَافَ لَوْلَا فَهْمُ الْمُحَرَّمِينَ ﴿٣٥﴾

36. Kuwa Beeniyey Aayaadkannaga oo iska Kibriya Xaggeeda kuwaasi waa Naarta Ehelkeeda wayna ku Waari.

وَالَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَاسْتَكْبَرُوا عَنْهَا أُولَئِكَ
أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٣٦﴾

37. Yaa ka Dulmi Badan Cid ku

فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ

Abuuratay Eebe Been ama Beenisa Aayaadkiisa, kuwaasu waxay Heli qaybtoodii loo qoray, markay u Timaaaddo Malaa'igtanada (Mawdka) oo Dili waxay ku Dhahaan Aaway waxaad Caabudayseen Eebe ka Sokow waxay Dhahaan way naga Dhumeen, waxayna ku marag Fureen Naftooda inay ahaayeen Gaalo.

يَا بَيْتِيَّةَ أُولَئِكَ يَنَا لَهُمْ نَصِيبُهُمْ مِنَ الْكِتَابِ حَتَّىٰ
إِذَا جَاءَهُمْ رَسُولُنَا يُخَوِّفُوهُمْ قَالُوا إِنَّمَا كُنْتُمْ
تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ قَالُوا اضْلُوعًا وَنَسِيهُدًا عَلَيَّ
أَنْفُسِهِمْ أَنْتُمْ كَانُوا كَفَّارِينَ ﴿٣٧﴾

Eebe wuxuu u Yeelay Ummad kasta waqti ayna kana dib Dhacayn kana hor marayn, wuxuuna uga digay Khilaafidda Rasuuladiisa, Taasoo ah in Ciddii Dhawrsata oo wanaag fasha ayan Cabsi iyo Murug midna arkayn, Ciddiise Beenisa Aayaadka Eebe oo iskibrisana ay Naar gali kuna Waari, cid ka Dulmi badaana ma jiro Ruux ku Been abuuratay Eebe ama Beeniyey Aayaadkiisa, wuxuuna la Kulmi Camalkiisii iyo wixii loo yaboohay, markay Dhimanna Malaa'igtaa Canaanata oo warsata waxay Caabudi jireen oo Eebe ka soo hadhay, waxayna qirtaan Gaalnimadii iyagoo waxay Caabudayeen ka Maqnaaday, Taasna waxay Dadka uga digi inay wax Eebe ka soo hadhay wax ka Dayaan. Al-Acraaf (34-37).

38. Wuxuu Yidhi Eebe la gala Naarta Ummado hortiin Tegay oo Jinni iyo Insiba leh, markastooy Ummadu Gas-ho waxay Lacnaddaa Walaasheed (Saaxiibkeed) markay isku haleelaan Dhammaantood Dhexdeedana waxay ku Dhahdaa Tan dambe (wax Raacda) Tan hore (la Raaco) Eebow kuwanaa na Dhumiyeey ee u Laablaab Cadaab, Eebe wuxuu Odhan mid kasta waa loo Laablaabi mase Ogidin.

قَالَ ادْخُلُوا فِي أُمَمٍ قَدْ خَلَتْ مِنْ قَبْلِكُمْ مِنَ الْجِنِّ
وَالْإِنْسِ فِي النَّارِ كَمَا دَخَلْتَ أُمَّةً لَعَنْتَ أَخْتَهَا
حَتَّىٰ إِذَا آذَرَكُوهَا فِيهَا جَمِيعًا قَالَتْ أَخْرَجْتُمْ
لَا أُولَهُمْ رَبَّنَا هَؤُلَاءِ أَضَلُّونَا فَتَاهُمْ عَذَابًا صِغْفَارًا
النَّارِ قَالَ لِكُلِّ ضِعْفٍ وَلَكِنْ لَا تَعْمَلُونَ ﴿٣٨﴾

39. Waxay ku Odhan Tan hore Tan Dambe wax Dheeraada naguma lihidin ee Dhadhamiya Cadaabka waxaad kasbanayseen Darteed.

وَقَالَتْ أُولَهُمْ لِأَخْرَجْتُمْ فَمَا كَانَ لَكُمْ عَلَيْهِمْ
فَضْلٌ فَذُوقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنْتُمْ تَكْسِبُونَ ﴿٣٩﴾

40. Kuwa Beeniyey Aayadkanaga oo iska Kibriyey looma Furo Iridaha Samada mana Galaan Janada intuu ka Galo Rati Irbad Dulkeed Saasaana ku abaal marinaa Dambiilayaasha.

إِنَّ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَاسْتَكْبَرُوا عَنْهَا لَا تُفَصِّحُ
لَهُمْ أَرْوَاحُ السَّمَاوَاتِ وَلَا يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ حَتَّىٰ يَلِجَ
الْجَمَلُ فِي سَمِّ الْبُيُوطِ وَكَذَلِكَ نَجْزِي الْمُجْرِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waxay ku Mudan Jahannamo Gogol, korkoodana waxaa ahaan Dabool, Saasaana ku Abaal marinaa Daalimiinta.

لَهُمْ مِنْ جَهَنَّمَ مِهَادٌ وَمِنْ فَوْقِهِمْ غَوَاشٍ وَكَذَلِكَ نَجْزِي
الظَّالِمِينَ ﴿٤١﴾

Eebe wuxuu ku Odhan Gaalada Maalinta Qiyaame la gala Naarta Ummado idinka horreeyey oo Jinni iyo Insiba leh, markay Naarta Galaanna inay Isnacladaan, Iyagoo Sheegi inay Dhumiyeen kuwaasu oyna warsan Eebe inuu u Laab Laabo Cadaabka, Dhammaantoodse waa loo Laab Laabi Cadaabka, Kan wax Dhumiyeey iyo Kan La Dhumiyeeyba, mase Oga, Calaacal iyo Qaylana wax uma tarto, kuwa Beeniyey Aayaadka Eebe oo iska Kibriyeyna Cirka looma Furo Jannana ma Galaan inta Rati ka galo Irbad Dulkeed, waana Abaalka Dambiilayaasha, Jahannamaana Hoos iyo Korba ka jiri Taasoo ah Abaalka Daalimiinta. waxaana ku soo arooray Nafta Fiican iyo Tan Xun Xadiith Dheer oo Sheegi in Tan Fiican loo Furi Samada lana soo Dhaweyn, Tan Xunna laga Xidhi Samada iyadoo Suudh Xun leh. Eebbaana ka Magan gallyay Xumaan. Al-Acraaf (38-41).

42. Kuwa Rumeeyey Xaqa oo Falay Camal Fiican, kuma Mashaqaaynno Naf waxayna Karin, Kuswaasu waa Jannada Ehelkeeda, wayna ku Dhex waari.

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَا نُكَلِّفُ نَفْسًا
الْأَوْسَعَهَا أَوْ لَيْسَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ هُمْ فِيهَا
خَالِدُونَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaana ka Siibnaa waxa ku Jira Laabtooda oo Xasada, waxaana Dareeri Hoostooda Wabiyadii, waxayna Dhahaan Mahad waxaa Mudan Eebaaha Nagu Hanuuniyey Kan (Wanaagga) Maannaan Hanuunneen haddaan Eebe na hanuunin, waxay la Timid Rasuuladii Eebaheen Xaq, waxaana loogu Dhawaaqay Tiinnani waa Jannadii Laydin Dhaxalsiiyey Camalkiinna Dartiis.

وَرَزَعْنَا مَا فِي صُدُورِهِمْ مِنْ غَلٍّ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهِمْ
الَّذِينَ هُمْ وَقَالُوا الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي هَدانا لِهَذَا وَمَا كُنَّا
لِنَهْتَدِيَ لَوْلَا أَنْ هَدانا اللَّهُ لَقَدْ جَاءتْ رُسُلًا
رَبَّنَا بِالْحَقِّ وَالْوُدْوَانِ أَنْ تُلْكَمُ الْجَنَّةَ أَوْ رَفِئْتُمْوهَا يَمًا
كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

Markuu Eebe Sheegay Kuwii Xumaa wuxuu Raaciyey kuwii Liibaanay, waana kuwa Xaqa Rumeeyey ee Camal Fiican falay, kuwaasoo ku Waari Jannada, oo Wanaag ku Dhanyahay, isagoo laga Daahiriyeey Xumaan iyo Xasadba, kuna Mahadin Eebahooda Hanuuniyey, Illeen Cidaan Eebe Hanuunin ma toosee, waxayna qiri in Rasuuladii Eebe Xaq la Yimaadeen, waxaana loogu Dhawaaqi inay Galaan Jannada iyagoo ku Dhaxli Camlkoodii Fiicnaa Dartiis.

Waxaa Xadiith ku Sugaaday in markay Mu'iniintu ka Nabaglaan Naarta lagu Joojin Meel u Dhaxaysa Jannada iyo Naarta, markaasaa laysu Qisaasi waxay isku Dulmiyeen Adduunkii, markii la Daahiriyo yaa loo Idmi inay Galaan Jannada. Wuxuuna Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Ku Dhaartay in mid kasta ka Garan Ogyahay Gurigiisa Janada in ka badan kii Addunka. Waxaa Wariyey (Bukhaari). Al-Acraaf (42-43).

44. Waxay u Dhawaaqaan Ehelu Jan-nuhu Ehelu Naarka waan helay wixii Eebe Noo Yaboohay. si Dhab ah ee idinku ma Hesheen wuxuu idiin yaboohay Eebe si Dhab ah, waxayna Dhahaan haa waxaana ka dhawaaqa Dhexdooda mid Dhawaaqa Lacnadda Eebe ha ku Dhacdo Daalimiinta.

وَتَادَى أَصْحَابُ الْجَنَّةِ أَصْحَابَ النَّارِ أَنْ قَدَّوْجَدْنَا
مَا وَعدْنَا رَبَّنَا حَقًّا فَهَلْ وَجَدْتُمْ مَا وَعدَ رَبُّكُمْ حَقًّا
قَالُوا نَعَمْ قَدَّوْجَدْنَا مَوْدِنَ بَيْنَهُمْ أَنْ لَعْنَةُ اللَّهِ عَلَى
الظَّالِمِينَ ﴿٤٤﴾

45. Ah kuwa ka Celiya Dadka Jidka

الَّذِينَ يَصُدُّونَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ وَيَعْبُدُونَهَا عِوَجًا وَهُمْ

Eebe lana Doona Qallooca, Iyagoo Aakhiro ka Gaalobay.

بِالْآخِرَةِ كَافِرُونَ ﴿٥٨﴾

46. Dhexdoodana waxaa ahaan Xijaab Acraafkana (Meel sare) waxaa ahaan Dad ku Garan Cid Kasta Calaamad-dooda, waxayna u Dhawaaqaan Ehelu Jannaha iyagoo ku leh Nabdgalyo Korkiina ha ahaato, mayna galin Jannada wayse damci.

وَبَيْنَهُمَا حِجَابٌ وَعَلَى الْأَعْرَافِ رِجَالٌ يَعْرِفُونَ كُنُفًا
بِاسْمِهِمْ وَتَادُوا أَصْحَابَ الْجَنَّةِ أَنْ سَلَلَتْ عَلَيْهِمْ
يَدُخُلُوهَا وَهُمْ يَنْظَمُونَ ﴿٥٩﴾

47. Markii loo Jeediyo Wajigooda Xagga Ehelu Naarka waxay dhahaaan Eebow ha na yeelin la Jirka Daalimiinta.

* وَإِذَا صُرِفَتْ أَبْصَارُهُمْ تِلْقَاءَ أَصْحَابِ النَّارِ قَالُوا رَبَّنَا
لَا تَجْعَلْنَا مَعَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٦٠﴾

Ehelu Jannuhu wuxuu la hadli Ehelu Naarka iyagoo warsanya inay Heleen wixii Eebe ugu Goodiyey ee Ciqaab ahaa, iyaguina way heleen wixii Wanaag ahaa Ee Eebe u Yaboohay, Waxayna ugu Jawaabeen inay Heleen, markaasaa Dhexdooda lagu Dhawaaqay Lacnadu ha ku Dhacdo Daalimiinta Dadka ka leexiya Jidka Eebe oo Qallooca la rabta, Aakharana ka Gaalobay, waxaana u Dhaxeeya Xijaab, Acraafkana waxaa ah Dad ku garan Cid kasta Calaamaddeeda, waxayna ugu Dhawaaqaan Ehelu Jannaha Nabadgalyo korkiinna ha ahaato waana Dad aan wali galin Jannada Doonahayase, haddii loo Jeediyo Xagga Ehelu Naarkana waxay dhahaaan Eebahanow ha na yeelin la jirka Daalimiinta. Aayaduhuna waxay Caddayn sida loo kala Bixi Maalinta Aakharo, Cid walbana ay u heli wuxuu Eebe ugu Yaboohay una Camal falay, wax isku qasanna uusan u jirin, Eebana waa Kariim Caadila Awoodna badan (Eebaana Kariima). Al-Acraaf (44-47).

48. Waxay u Dhawaaqayaan Dadka Acraafku Dad ay ku garan Calaamad-dooda, waxayna ku Odhan waxba idiinma tarin badnaantiinii (Kulankiinnii) iyo Waxaad isku Kibrinayseen.

وَتَادُوا أَصْحَابَ الْأَعْرَافِ رِجَالًا يَعْرِفُونَهُمْ بِأَسْمَائِهِمْ قَالُوا
مَا أَعْنَىٰ عَنْكُمْ جَمْعُكُمْ وَمَا كُنْتُمْ تُسَمَّيْتُمْ كُفْرًا ﴿٦١﴾

49. Ma kuwanaa kuwaad ku Dhaara-teen inaan Eebe Gaadhsiinayn (Siinayn) Naxariis (Waxaana lagu Odhan) Gala Janada idinkoon Cabsi iyo Walbahaar midna Arkayn.

أَهْوَلَاءِ الَّذِينَ أَقْسَمْتُمْ لَا بِنَا لَهُمُ اللَّهُ بِرَحْمَةٍ أَدْخُلُوا
الْجَنَّةَ لَا تَخُوفٌ عَلَيْكُمْ وَلَا أَنْتُمْ تَحْزَنُونَ ﴿٦٢﴾

50. Waxay u Dhawaaqi Ehelu Naarku Ehelu Jannaha (Iyagoo dhihi): Noogu soo Deeqa Biyaha ama waxa Eebe idinku Arzaaqay, waxayna Dhahaaan Eebe wuu ka Xarrimay Labadaas Gaalada.

وَتَادُوا أَصْحَابَ النَّارِ أَصْحَابَ الْجَنَّةِ أَنْ أَفْضُوا عَلَيْنَا
مِنَ الْمَاءِ أَوْ مِمَّا رَزَقَكُمُ اللَّهُ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ
حَزَمَهُمَا عَلَى الْكَافِرِينَ ﴿٦٣﴾

51. Ee ah kuwa ka Yeeshay Diintooda

الَّذِينَ اتَّخَذُوا دِينَهُمْ لَهْوًا وَلَعِبًا وَغَرَّتْهُمُ الْحَيَاةُ

Madadaalo iyo Ciyaar, oyna Dhagartay Nolosha Adduunyo, Maanta wuu ku Dayn Naarta siday u Halmaameen la kulanka Maalintan, iyo Diiddadooda Aayaadkannaga Dartiis.

الذُّنِبَ أَفْأَيُّومَ نَسْأَلُهُمْ كَمَا نَسَأَلُ لِقَاءَ يَوْمِهِمْ
هَذَا وَمَا كَانُوا بِآيَاتِنَا يَجْحَدُونَ ﴿٥١﴾

Waxayna u Dhawaaqaan Dadka Acraafku Dad ay ku Garan Calaaamaddooda oy kuna Dhihi waxba idiinma tarin waxaad kulminayseen iyo Waxaad kashanayseen waana kuwaas kuwaad ku Dhaaranayseen inuusan Eebe Siinayn Naxariis, waxaana lagu Odhan Gala Janada idinkoon Cabsi iyo Murugo midna Arkayn, waana Dadkii Rumeeyey Xaqa, waxaase Dhawaaqay Ehelu Naarkii (Eebaan ka magan gallaye) iyagoo ku Dhihi Ehelu Jannaha Biyaha wax naga siiya oo noogu Deega, iyo waxa Eebe idinku Arzaaqay waxayna dhahaan Eebaa ka Xarrimay Gaalada ka Yeeshay Diintooda Madadaalo iyo Ciyaar, oyna Dhagartay Nolosha adduunyo, Maalinta Qiyaamana waxaa lagu Dhex dayn Naarta siday u Halmaameen la Kulanka Maalintaas, Aayaadkana u Diideen. /48-51).

52. Dhab ahaan baannu ugula Nimid Kitaab Aannu Caddaynay Annagoo ku Cilmi leh, Isagoo Hanuun iyo Naxariis u ah Ciddii Rumayn.

وَلَقَدْ جِئْتَهُمْ بِكِتَابٍ فَصَّلْنَاهُ عَلَىٰ عَلَيْهِمْ هُدًى
وَرَحْمَةً لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٥٢﴾

53. Miyey Sugi waxaan ahayn wuxuu Sheegi Quraanku, Maalintuu Yimaaddo wuxuu Sheegi Quraanku waxay Odhan kuwii Horay u Halmaamay (Kuna Camal falin) waxay la Timid Rasuulladii Eebe Xaq, ee majiraa Shu-faco ha noo Shafeeceeene, ama ma nala Celin inaan Fallo waxaan ahayn waxaan fali jirray, waxay Khasariyeen Naftooda waxaana ka Dhumay waxay been abuuran jireen.

هَلْ يَنْظُرُونَ إِلَّا تَأْوِيلَهُ يَوْمَ يَأْتِي تَأْوِيلَهُ يَقُولُ
الَّذِينَ نَسُوهُ مِنْ قَبْلُ قَدِجَاتٌ رُسُلٌ رَبِّنَا بِالْحَقِّ
فَهَلْ لَنَا مِنْ شُفَعَاءَ فَيَشْفَعُوا لَنَا أَوْ نُرَدُّ فَنَعْمَلْ
غَيْرَ الَّذِي كُنَّا نَعْمَلُ فَدَخَسُوا نَفْسَهُمْ
وَصَلَّ عَنْهُمْ مَأْكِنًا أَوْ يَفِرُّونَ ﴿٥٣﴾

54. Eebihiiin waa kan ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Lix Maalmood kana kornoqday Carshiga, wuxuuna ku Daboolaa Habeenka Maalinta, wuuna doonaa Habeenku si Degdega, Qorraxda Dayaxa iyo Xidigahana waxaa loo Sakhiray Amarka Eebe, Eebaana Abuuridda iyo Amarkaba iska leh, waxaana waynaaday «oo Khayrbatay» Eebaha barbaariya Caalamka).

إِنَّ رَبَّكُمُ اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ
أَيَّامٍ ثُمَّ اسْتَوَىٰ عَلَى الْعَرْشِ يُعْشَىٰ لَيْلَ النَّهَارِ
يُطَلِّبُهُ حَشِيئًا وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ وَالنُّجُومَ
مُسْحَرَاتٍ بِأَمْرِهِ ۗ أَلَا لَهُ الْخَلْقُ وَالْأَمْرُ تَبَارَكَ
اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ ﴿٥٤﴾

Eebe wuxuu soo Dejiyey Kitaabka Quraanka ah oo Cad, Wanaagna ku Dhanyahay, Gaalase waxay Xaqiiqada Dhabta ah ogaan markuu u Yimaaddo Wuxuu sheegi oo Xaq ah, waxaana Khasaari Ciddii

iska Nacday oon ku Camal falin oo iska halmaantay, waxayna ku Calaacali inay Rasuuladii eebe Xaq ula yimaadeen, Yaase u Shafeeci ama u Celin Addunkii si ay Camal fiican u falaan. Aayadda kale waxay ka warrami Awoodda Eebe iyo Siduu u Abuuray Cirka, Dhulka, Qorraxda, Dayaxa, iyo Xidigahaba, uguna Sugnaaday Abuuridda iyo amarkuba, waana Allaha wayn ee Khayrka badan Caalamkana Eebe u ah. Aayaddana kama Muuqdo wax Eebe Khalqigiisa ku dhawecya, Jidka Xaqa ah ee Toosanna waa in la raaco Jidkii hore ee Suubanaa.

Wuxuu Yidhi Nucaym Binu Xamaad Sheekhii Bukhaari: Ciddii Eebe u ekaysiisa Dadka wuu Gaalobay, Ciddii Diidda wax Eebe Isku Tilmaamayna wuu Gaalobay, wuxuu Eebe isku Sheegay ama Rasuulkiisu ku Tilmaamay u ekaysiin ma leh, waana in Eebe Xumaan laga Dheereeyo Wanaagna lagu Tilmaamo. Al-Acraaf (52-54).

55. U barya Eebihii si Khashuuc ah iyo Qarsoodi Illeen Eebe ma jecla kuwa Xad gudbee.

أَدْعُوا رَبَّكُمْ تَضَرُّعًا وَخُفْيَةً إِنَّهُ لَا يُحِبُّ
الْمُعْتَدِينَ ﴿٥٥﴾

56. Hana fasaadinnina Dhulka inta la Wanaajiyey ka dib, Baryana Eebe Cabsi iyo Doonidba, Naxariista Eebana waxay u Dhawdahay kuwa Samaha Fala.

وَلَا تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَاحِهَا وَادْعُوهُ خَوْفًا
وَطَمَعًا إِنْ رَحِمَتِ اللَّهُ قَرِيبًا مِنَ الْمُحْسِنِينَ ﴿٥٦﴾

57. Eebe waa kan u dira Dabaysha Bishaaro Naxariistiisa (Roobka) hortiiisa, markay Xambaarto Daruur Culusna waxaan u Kaxaynaa Dhul Dhintay (Abaar) waxaana ku Dejinnaa (Shubnaa) Biyaha, waxaana ku soo Bixinnaa Midho Kasta, saasaana u soo Bixinnaa wixii Dhintay, inaad Xusuusataan.

وَهُوَ الَّذِي يُرْسِلُ الرِّيحَ بُشْرًا لَبَدَاتٍ بِإِذْنِ رَحْمَتِهِ
حَتَّىٰ إِذَا أَقْبَسَتْ سَحَابًا لَيُقَالَا سَفَيْتُنَا لِبَدَلِ مِمَّا نُنزِّلْنَا
بِهِ الْمَاءَ فَأَخْرَجْنَا بِهِ مِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ ﴿٥٧﴾
كَذَٰلِكَ نُفَخِّجُ السُّمُومَ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿٥٨﴾

58. Dhulka Fiican wuxuu ku soo baxaa Dooggiisu idinka Eebe, midka Xunna waxaan Dhib ahayn kuma soo baxo, saasaan ugu Caddaynaa Aayaadka Ciddii ku shukrin Eebe.

وَالْبَدَلُ الطَّيِّبُ يَخْجُبُ بَثَّهُ إِذَا ذُنُوبُهُ وَالَّذِي حَبِطَ
لَا يَخْجُبُ إِلَّا تَذَكُّرًا كَذَٰلِكَ نُصَرِّفُ الْأَلْبَابَ لِقَوْمٍ
يَسْكُرُونَ ﴿٥٨﴾

Eebe waa in loo Baryaa si Habboon, Dhulka waa in wanaag lagu joogaa oon la fasaadin inta Eebe wanaajiyey ka dib, Eebe waa in lagu Xidhnaado Illeen Naxariistiisu waxay u Dhawdahay sama falayaashee, Wuxuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe krokiisa ha yeelee) ku Yidhi Asaxaabta: Dadyahow u dhimriya Naftiinna idinku uma Dhawaaqaysaan Eebe Dhaga la' ama Maqane, Eebahaad baryeysaan waa Maqle Dhaw.

Aayadaha kale waxay ka warrami sida Eebe ugu Nicmeeyey Addoomadiisa Roobna ugu keeno, uguna Nooleeyo Dhul Dhintay, uguna soo Bixiyo Doog iyo Barwaaqo si ay Calaamo ugu Noqoto Awoodda Eebe iyo inuu soo Nooleeyn karo wixii Dhintay, Dadkuna waxay la mid Yihiin Dhulka oo midna Khayrbaa ka imaan oo Xaquu Raaci sida Dhul Roob wax ka soo saaray, midna waa Xaqdiide sida Dhul Xun oon wax soo Dhalayn, Taasina Dadkaa loo Caddayn inay wax gartaan. Al-Acraaf (55-58).

59. Waxaan u Dirray Nabi Nuux Qoomkiisii, wuxuuna ku Yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe, idiinma sugna macbuud cibaado mudan oo ka soo hadhaye, anugu waxaan idiinka Cabsan Cadaab Maalin Wayn.

لَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ فَقَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِن إِلَهٍ غَيْرُهُ ۖ إِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿٥٩﴾

60. Waxay Dheheen Madaxdii Qoomkiisa ka mid ahayd waxaan kugu Aragnaa Baadi Cad.

قَالَ الْمَلَأُونَ قَوْمَهُ إِنَّا لَنَرَاكَ فِي صَلٍّ مُّبِينٍ ﴿٦٠﴾

61. Wuxuuna yidhi Qoomkayow Baadi kuma Sugni Waxaanse ahay Rasuulki Eebaha Caalamka.

قَالَ يَا قَوْمِ لَيْسَ بِي صِلَّةٌ ۖ وَلَكِنِّي رَسُولٌ مِّن رَّبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٦١﴾

62. Waxaana idin soo Gaadhsiin Farriinta Eebahay, waana idiin Naseexayn, waxaana ka ogahay Xagga Eebe waxaydaan Ogayn.

أَيُّغْفِرُ لَكُمْ رِسَالَتِي ۖ وَالَّذِينَ لَكُمْ مِن آيَاتِهِ مِّنَ اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٦٢﴾

63. Ma waxaad la Yaabteen inuu idiinla yimid Nin idinka mida Xuska Eebihiin, si uu idiinku digo iyo inaad dhawrsataan laydiinna Naxariisto.

أَوْ عَجِبْتُمْ أَن جَاءَكُمْ ذِكْرٌ مِّن رَّبِّكُمْ عَلَىٰ رَجُلٍ مِّنكُمْ لِيُنذِرَكُمْ وَلِتَتَّقُوا ۚ وَلَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٦٣﴾

64. Wayse Beeniyeen waxaanna ku korinnay Nuux iyo intii la jirtay Doontii, waxaanna Maanshaynay kuwii Beeniyey Aayaadkannaga, Illeen waxay ahaayeen Qoom indhala' (Xaqa arkayn).

فَكَذَّبُوهُ فَأَعْيَبُونَهُ ۖ وَالَّذِينَ مَعَهُ فِي الْفُلِكِ وَالَّذِينَ فِي الْبَرِّ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا ۖ إِنَّا هُمْ كَأَوْقَوْمٍ عَمِيَّتٍ ﴿٦٤﴾

Quraanku wax badan yuu ka warramay Nabi Nuux iyo Nabiyada kalaba, siday Xaqa u Gaadhsiiyeen Dadkii iyo siday u Beeniyeen, Iyagoo Nabiyadu Nasteex u ah Qoomkoodii, iyaguna ka Madax adaygi, waxase loo Baahanyahay in lagu Waano qaato, Xaqana la raaco, waxayse Noqotay Cidhibti Qoomkii Nabi Nuux in la halaqo oo Biyo iyo Duufaan lagu Maansheeyo, Nabi Nuux iyo Intii raacadayna ay Nabad galaan oo u Hadhaan Dhulkii Iyagoo Doon koray.

Maxamed Binu Isxaaq wuxuu Yidhi: Nabi Nuux wuxuu la kulmay cid la kulantay ma jirto Nabi la Dilay mooyee.

Ibnu Cabbaasna wuxuu yidhi: Qoomkii Nabi Nuux waa qoomkii ugu horreeyey ee Caabuda Sanam.

Ujeeddadu waa in Xaqa la Raaco, Xumaantana laga leexo si loo Liibaano. Al-Acraaf (59-64).

65. Waxaan u Dirray Caadna Walaalkood (Nabi) Huud wuxuuna yidhi: Qoomkayow Caabuda Eebe, idiinma sugna macbuud xaq ah oo ka soo hadhay isaga, Miyeydaan Dhawrsanayn.

﴿٦٥﴾ وَإِلَىٰ عَادِ أَخَاهُمْ هُودًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِن إِلَهٍ غَيْرُهُ ۚ وَأَقْلَابًا تَتَّبِعُونَ ﴿٦٥﴾

66. Waxay Dheheen Madaxdii Gaalowday oo Qoomkiisa ka mid ah, Annagu waxaan kugu aragnaa Safaaho (caqli xumo) waxaanna kuu malaynaynaa inaad ka mid tahay Beenaalayaasha.

قَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَوْمِهِ إِنَّا لَنَرِيكَ فِي سَفَاهَةٍ وَإِنَّا لَنُظُنُّكَ مِنَ الْكَذِبِينَ ﴿٦٦﴾

67. Wuxuuna yidhi Qoomkayow Safaaho (caqli xumo) imahayso waxaanse ahay Rasuul Eebaha Caalamka.

قَالَ يَقُولُوا لَيْسَ بِي سَفَاهَةٌ وَلَكِنِّي رَسُولٌ مِنْ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٦٧﴾

68. Waxaana idin soo gaadhsiin Fariinta Eebahay, waxaana idiin ahay Nasteex Aamina.

أَتِيغُكُمْ رَسُولَاتِي وَإِنَّا لَكُمُ نَاصِحٌ أَمِينٌ ﴿٦٨﴾

69. Ma waxaad la Yaabteen inuu idiinla Yimid Xuska Eebihiin Nin idinka mid ah, inuu idiin Digo, Xusuusta Markuu idinka yeelay Eebe kuwa u Hadhay (Dhulka) Qoomkii Nabi Nuux ka dib, idiinna kordhiyey Xoog, ee Xusuusta Nicmada Eebe, waxaad u Dhawdhiin inaad Liibaantaane.

أَوْعَجِبْتُمْ أَن جَاءَكُمْ ذِكْرٌ مِنْ رَبِّكُمْ عَلَى رَجُلٍ مِّنْكُمْ لِيُنذِرَكُمْ وَأَذُنُّكُمْ إِذْ جَعَلَكُمْ خُلَفَاءَ مِنْ بَعْدِ قَوْمِ نُوحٍ وَرَادَّكُمْ فِي الْخَلْقِ بَضْطَةً فَأَذُنُّوا لِلَّهِ الْعَالَمِينَ ﴿٦٩﴾

Sidoo kale wuxuu Eebe u diray caad Nabi Huud, waana Caadkii hore, wuxuuna ku Waaniyey inay Eebe kaliya uun Caabudaan, Dhawrsadaanna Illeen macbuud xaqa oo kale ma lehe, Madaxdiise way Gaaloobeen oo Diideen Xaqii oo Xumaan iyo Caqli yari ku Sheegey Nabigii, wuxuuse u Sheegay inuusan Caqli Xumayn, ee uu Yahay Rasuul Eebaha Caalamka, Gaadhsiiina Fariinta Eebe, Yahayna Nasteex Aamina, oyna habboonayn inay la yaabaan in waxyi lagu soo Dejiyo Nin ka mid ah, inuu u Digo, wuxuuna Xusuusiyey in Eebe ka Yeelay kuwo ka soo hadhay kana dambeeya Qoomkii Nabi Nuux, Xoogna Eebe u Yeelay, oyna Waajibna ku tahay inay Xusuustaan Nicmooyinka Eebe, inay Liibaanaan. Taasina waxay ku tusin inay xaqa iyo Xumaantu Dagaallamaan had iyo jeer, Wanaaguna Hadho Xumaantuna Tirtiranto.

Taasoo Muujin in Xaqa lagu sugnaado, Xumaantana laga Leexdo. Al-Acraaf (65-69).

70. Waxay Dheheen ma waxaad noola timid inaan Caabudno Eebe Kaliya, oon ka Tagno Waxay Caabudayeen Aabayaalkanno, noo keen waxaad noogu Goodiyeysay Haddaad runle tahay.

قَالُوا أَجِئْتَنَا بِالْعَبِيدِ اللَّهُ وَرَحْمَةٌ وَنَذَرُ مَا كَانُوا يَعْبُدُونَ أَبَاؤُنَا قَالُوا إِنَّمَا تَعْبُدُونَ إِنْ كُنْتُمْ مِنَ الصَّادِقِينَ ﴿٧٠﴾

71. wuxuu yidhi waxaa idinkaga Dhacaya Xagga Eebe Cadaab iyo Cadho, ma waxaad igula Murmaysaan Magacyo ood Magacooowdeen idinka iyo Aabayaalkiin oon Eebe u soo Dejinin Xujo, Suga anna waan idinla Sugiyey.

قَالَ قَدْ وَقَعَ عَلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ رِجْسٌ وَغَضَبٌ أَتُحَدِّثُونَ فِي أَسمَاءِ سَمَّيْتُمُوهَا أَنْتُمْ وَآبَاءُكُمْ مَا نَزَّلَ اللَّهُ بِهِمَا مِنْ سُلْطَانٍ فَأَنْظِرُوا إِنِّي مَعَكُمْ مِنَ الْمُنظِرِينَ ﴿٧١﴾

72. Markaasaan Korinnay isaga iyo Intii la jirtay, Naxariistanada Darteed, waxaanna Goynay Cidhibta kuwa Beeniyeey Aayaadkannaga, mana ayan Rumayn (Xaqa).

فَأَنجَيْنَاهُ وَالَّذِينَ مَعَهُ بِرَحْمَةٍ مِنَّا وَنَطَقَنَّا
دَابِرَ الَّذِينَ كَذَبُوا بِآيَاتِنَا وَمَا كَانُوا
مُؤْمِنِينَ ﴿٧٢﴾

Nabi Huud iyo Nabiyada kalaba waxay la Yimaaddeen in Eebe kaliya la Caabudo, haseyeeshee way la Yaabeen Gaaladii Caad, waxayna diideen inay ka tagaan waxay Aabayaalkood Caabudi Jireen, waxaase ku Dhacay Ciqaab iyo Cadho Eebe, Illeen Cilmi la'aan yey ku Murmeen Eebe iyo Xaqiyeey, waxaana la Cidhibtiray intii Beenisay Xaqa ee Gaalada ahayd, Sidii lagu halaagayna waxaa Caddeeyey Aayado kale oo badan, oo Tilmaami sidii loo halaagay markay kibreen oo Xaqii Beeniyeen, Taasuna waa u Digid Ciddii marta waddadoodii, oo Xaqa ka Madax adaygta, Cid Xoog iyo Tabar ku Faani kartana ma jirto Illeen Dad waa Miskiin Tabar yare, Al-Acraaf (70-72).

73. Waxaan u Dirray Thamuudna Walaalkood Nabi Saalax, wuxuuna yidhi Qoomkayow Caabuda Alle wax ka soo hadhay Alle oo cibaado mudan idiinma sugnee, waxaa idiinka timid Xagga Eebe Xujo (Cad) Tanna waa Hashii Eebe, waxayna idiin tahay Calaamo, ee iska Daaya ha ka Cunto Dhulka Eebe, hana ku taabanina Xumaan oo markaas idin qabto Cadaab Daran.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا أَصْحَابُ الصَّالِحِينَ كَانُوا يَكْفُرُونَ وَأَعْيَبُوا
اللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَهِ غَيْرُهُ وَقَدْ جَاءَكُمْ بَيِّنَةٌ
مِّنْ رَبِّكُمْ هَذِهِ نَافَةُ اللَّهِ لَكُمْ آيَةٌ
فَذُرُّوهَا تَأْكُلْ فِي الْأَرْضِ اللَّهُ لَا تَسْمُوهَا
يَسُوعَ فَإِذَا خُدَّكُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

74. Xusuusta markuu idinka yeelay (Eebe) kuwo Baddalay Caad, kadib idin Dajiyeyna Dhulka, idinkoo ka Yeelay Dooxyaheeda Daaro, ood kana qoraysaan Buuraheeda Guryo, Xusuusta Nicmooyinka hana Fasaadinina Dhulka.

وَأَذْكُرُوا إِذْ جَعَلَكُمْ خُلَفَاءَ مِنْ بَعْدِ عَادٍ
وَبَوَّأَكُمْ فِي الْأَرْضِ تَتَّخِذُونَ مِنْ سُهولِهَا
قُصُورًا وَتَنْجَسُونَ الْجِبَالَ بُيُوتًا فَآذْكُرُوا
ءَالَءَ اللَّهِ وَلَا تَعْتُوا فِي الْأَرْضِ
مُفْسِدِينَ ﴿٧٤﴾

75. Waxayna ku dheheen Madaxdii Iskibrisay oo Qoomikiisa ka mida kuwii Tabarta yaraa oo Rumeeyey: ma waxaad Ogtihiin in Saalax laga soo diray Xagga Eebe, waxayna dheheen Annagu waxa lagu diray waan rumaynay.

قَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا مِنْ قَوْمِهِ لِلَّذِينَ
اسْتُضِعُوا لِمَنْ ءَامَنَ مِنْهُمْ أَتَعْلَمُونَ أَنَّنِي
صَلِّحًا مَّرْسَلًا مِنْ رَبِّيهِ قَالَ أُوْلَئِكَ إِنَّمَا أُرْسِلُ
بِهِمْ مُؤْمِنُونَ ﴿٧٥﴾

76. Waxayna dheheen kuwii iskibriyey annagu waxaad Rumeeyseen waan ka Gaaloownay.

قَالَ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا إِنَّا يَا لَأَذَى
ءَامِنْتُمْ بِهِ كَمَا مَرَّ فِيكُمْ ﴿٧٦﴾

Reer Thamuud waxay ahaayeen qoom Caraba oo loo soo Diray Nabi Saalax, Wuxuuna Faray inay Eebe kaliya Caabudaan una sheegay in Hasha loo soo diray ay Calaamo u tahay, oyna nabadgaliyaan, Xusuustaanna Nicmooyinkii Eebe, Dhulkana ayan Fasaadin, waxaase iskibriyey sidii Caadada ahayd kuwii Madaxda ahaa, iyagoo warsan warsi Xun in (Nabi) Saalax laga soo diray xagga Alle, waxayna Caddeeyeen inay diideen waxa lagu soo diray Nabi Saalax, Mu'miniitiise waxay Caddeeyeen inay Xaqa Rumeeyeen, Saas darteed waa inaan Cidna ismoodin inay iyadu Xaqa ka sarrayso ama Awood leedahay, Illeen Xaqa Mudan in la raacee. Al-Acraaf (73-76).

77. Waxayna Dileen Hashii waxayna ka Madax adaygeen amarkii Eebahood, waxayna dheheen Saalaxow noo keen waxaad noogu Goodiyeeyso haddaad tahay mid la soo Diray.

فَعَقَرُوا الْكَافَّةَ وَعَتَمُوا عَنْ أَمْرِ رَبِّهِمْ وَقَالُوا
يَصْلِحُ أَقْنَابِنَا مَا تَعْدُنَا إِن كُنْتِ مِنَ
الْمُرْسَلِينَ ﴿٧٧﴾

78. Waxaana qabtay Gariirkii waxayna ahaadeen kuwo Guryahoodii ku Dhintay.

فَأَخَذَتْهُمُ الرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا فِي دَارِهِمْ
جُثُودًا ﴿٧٨﴾

79. Wuxuuna ka Jeedsaday «Nabi Saalax» xaggooda, wuxuuna yidhi: waan idin Gaadhsiiyey Farriintii Eebahay waana idiin Naseexeeyey Mase Jeclidiin Nasteexa.

فَتَوَلَّى عَنْهُمْ وَقَالَ يَا قَوْمِ لَقَدْ أَبْلَغْتُكُمْ
رِسَالَةَ رَبِّي وَنَصَحْتُ لَكُمْ وَلَكِنْ لَأَنْجِبُونَ
التَّوْحِيحِينَ ﴿٧٩﴾

Waxay Caddayn Aayaduhu inay Dileen Hashii, inkastoo la Sheegay in Nin kaliya Dilay Haddana waxay Aayaddu Sheegtay inay Dhammaan wax ka Dileen Illeen Raalli bay ka ahaayeen Dilkeedee, waxayna ku Dambeeyeen in Dhul gariir lagu halaagay, oy Guryahoodi ku Bakhtiyeen, Nabi Saalaxna wuxuu Sheegay inuu ku Dadaalay siday Xaqa u Rumayn lahaayeen uguna Naseexeeyey mase Jeclayn kuwa Naseexeeya. Taasina waxay Caddayn in Ciddii Xaqa iyo Naseexada Diidda ay la Kulmi Ciqaab iyo Halaag, waxaa kale oo ay ku Tusin inay Waajib tahay in Jidka Toosan la Raaco, Xumaantana laga Leexdo. Al-Acraaf (77-79).

80. Xusuuso Nabi Luud Markuu ku yidhi Qoomkiisii: Ma waxaad la imaanaysaan Xumaanta usan idiinka hormarin Ruux Caalamka ka mid ah.

وَلَوْ طَائِفَةٌ لَقَالُوا لَقَوْمِهِمْ أَتَانُوا الْفِتْنَةَ
مَا سَبَقَكُمْ بِهَا مِنْ أَحَدٍ مِنَ الْعَالَمِينَ ﴿٨٠﴾

81. Idinku waxaad u Tagaysaan Ragga Hunguriyeeyn Darteed, Haweenka ka sokow, waxaadse tihiin qoom Xad Gudbay.

إِنَّكُمْ لَتَأْتُونَ الرِّجَالَ شِعْوَةَ مَن دُونَ
النِّسَاءِ أَلَمْ يَأْتِكُمْ قَوْمٌ مُّسْرِفُونَ ﴿٨١﴾

82. Waxayna ahayd Jawaabtii qoomkiisa, ka Bixiya Luud iyo inta Rumaysay Magaaladiinna waaba Dad isdaahiri-nayee.

وَمَا كَانَ جَوَابَ قَوْمِهِمْ إِلَّا أَنْ قَالُوا
أَخْرِجُوهُمْ مِّنْ قَرْيَتِكُمْ إِنَّهُمْ أَنَاسٌ
يِّطْهَرُونَ ﴿٨٢﴾

83. Waana Korinnay Luud iyo Ehelkii-sa Haweenaydiisii mooyee oo ka mid noqotay kuwa halaag ku hadhay.

فَأَنجَيْنَاهُ وَأَهْلَهُ إِلَّا أُمَّرَأَةً ۖ كَانَتْ مِنَ
الْفٰكِرِينَ ﴿٨٣﴾

84. Waxaanna ku soo Daadinnay Roob (Naareed), bal day siay Noqotay Cidhibtii Dambiilayaasha.

وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِمْ مَطَرًا فَأَنْظَرُوا ۖ كَيْفَ كَانَ
عَاقِبَةُ الْمُجْرِمِينَ ﴿٨٤﴾

Qoomkii Nabi Luudna waxay ahaayeen kuwo Akhlaaq Xun, oo Haweenka ka Leexda oo Ragga aada, Markuu ka Waaniyeyna waxay isfareen in Luud iyo inta Rumaysay laga Bixiyo Magaalada, iyagoo ku Caayey inay Yihiin kuwo Nadiifa, Eebaase Halaagay, Nabadna Galiyey Nabi Luud iyo intii Rumaysay. waxaadna halkaas ku aragtaan in marka Akhlaaqdu Xumaato ay Dadka iskaga darmaan Wanaagga iyo Xumaantu.

Goormayse Nadaafaddu Ceeb noqotay, waana wax la yaab leh in Wanaag laysku Caayo. Qataadana wuxuu Yidhi: Way Caayeen Ceeb la'aan. Al-Acraaf (80-84).

85. Madyanna waxaan u Dirray Walaakood Nabi Shucayb wuxuuna yidhi Qoomkayow Caabuda Alle, idiinma sugna Alle ku ka soo hadhaye, waxaa idiinka Timid Xagga Eebe Xujee, Dhammaystirana Miisidda iyo Miiisaanka, hana ka Nusqaaminina Dadka waxooda, hana Fasaadinnina Dhulka wanaajin kadib, saasaa idiin khayr roon haddaad Mu'miniin tihiin.

وَالِى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا ۖ قَالَ يَبْقَرُوا بَعْدَ مَا
أَعْتَدُوا لِلَّهِ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهِ غَيْرُهُ ۖ قَدْ جَاءَتْكُمْ بَيِّنَةٌ
مِّن رَّبِّكُمْ ۖ فَأُولَ الْكٰفِرِىۡنَ وَالْمُزِيۡرِىۡنَ
وَلَا تَتَّبِعُوهُمُ ۚ إِنَّهُمْ أَسَآءُ مَا هُمْ
وَلَا تَقْسِدُوا فِى الْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَاحِهَا
ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ
مُؤْمِنِينَ ﴿٨٥﴾

86. Hana Fadhiisannina Jid kasta idinkoo Goodin oo ka Celin Dadka Jidka Eebe Ciddii Rumaysa idinkoo Qallooc la dooni, xusuustana markaad yareydeen oo Eebe idin badiyey, dayana siday Noqotay Cidhibtii Fasaadiyayaasha.

وَلَا تَقْعُدُوا بِكُلِّ صِرَاطٍ تُوعَدُونَ
وَتَصُدُّونَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ مَنۢ مِّنۡ أُمَّةٍ
بِهِ ۖ وَتَبْغُونَهَا عِوَجًا ۖ وَأَذْكَرٌ لَّيَالَىٰ
فَكَتَرَكُمۡ وَأَنْظَرُوا ۖ كَيْفَ كَانَتْ
عَاقِبَةُ
الْمُفْسِدِينَ ﴿٨٦﴾

87. Haddayse Koox idinka mida Rumaysay waxa laygu soo Diray Kooxna ayna Rumeynin Samra (Suga) inta Eebe ka kala Xugmin Dhexdeenna, Isagaa Xaakimmo u Khayr Roon.

وَإِن كَانَ طَآئِفَةٌ مِّنْكُمْ ءَامَنُوا بِأَلۡدَىٰ
أُرۡسِلَتۡ بِهِ ۖ وَطَآئِفَةٌ لَّا يُؤۡمِنُوۡا فَاصۡبِرُوا ۖ
حَتَّىٰ يَخۡرُجَ اللَّهُ بِبَيِّنَاتٍ ۖ وَهُوَ خَيْرُ الْحَاكِمِينَ ﴿٨٧﴾

Waxaa lagu Sheegay Madyan inay ahayd Meel u Dhaw Magaalada Macaan ee Urdu, wuxuuna ka waaniyey Nabi Shucayb inayna Nusqaaminin Miisidda iyo Miisaanidda, Dadkana Khayaamin, Dhulkana ayan Fasaadin Wanaajin kadib, Jidkana ayan Fadhiisan iyagoo Xaqa Dadka ka Celin iyagoo Qallooc la raba, iyagoo laga rabo inay Xusuustaan sida Eebe u Badiyey iyagoo yaraa, haddayse Koox

rumaysay Xaqa midna Beenisay ha la sugo ina Eebe ka kala Xukumo, illeen isagaa Xaakimmo u khayr Roon.

Waxayna aayaduhu ku Tusin Xumaan falka Qoomkaas, maxayse ka heleen oon ahayn waxa aayaduhu Sheegi doonaan oo Ciqaab darana. Al-Acraaf (85-87).

88. Waxay dheheen Madaxdii Iskibrisay oo Qoomkiisii ah waxaannu kaa Bixin Shucaybow adiga iyo kuwa ku Ru-meeyey Magaaladannada ama waxaad ku soo Noqon Diintanada, wuxuuna yidhi oo haddaan Necebnaahayna.

﴿ قَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا مِنْ قَوْمِهِ لِنُخْرِكَكَ بِسُوءِ بَشَاعَتِهِمْ وَذُنُوبِهِمْ أَنِ امْنُوا مَعَكُمْ مِنْ قَوْمِنَا أَوْ لَنَعُودَنَّ فِي مِلَّتِنَا قَالَ أُولُو كُفْرِهِمْ ﴾

89. Waxaan ku Been abuurannay Eebe haddaan ku noqonno Diintiinna inta Eebe naga Koriyey ka dib, Nagumana habboona inaan ku Noqonno in Eebe Doono Mooyee, Illeen Eebbaa Cilmi-giisu waasac yahaye, waxaanna talo Saarannay Eebe, Eebow Nagu kala Xukun Dhexdanada Xaq, adaa Xaakin u Khayr Roon e.

﴿ قَدْ أَفْرَقْنَا عَلَى اللَّهِ كَذِبًا إِنْ عُدْنَا فِي مِلَّتِكُمْ بَعْدَ إِذْ بَعَثْنَا اللَّهُ مِنْهَا وَمَا يَكُونُ لَنَا أَنْ نَعُودَ فِيهَا إِلَّا أَنْ يَسْأَلَنَا اللَّهُ رَبُّنَا وَسِعَ رَبُّنَا كُلَّ شَيْءٍ عِلْمًا عَلَى اللَّهِ تَوَكَّلْنَا رَبُّنَا أَفْتَحْ بَيْنَنَا وَبَيْنَ قَوْمِنَا بِالْحَقِّ وَأَنْتَ حَكِيمٌ الْقَلْبِيِّنَ ﴾

Aayadahan waxay ka warrami waxay la qaabileen Nabi Shuceyb iyo inta la jirtay oo Mu'miniinta ah, oyna ugu Gooddiyeen inay ka Eryi magaalooda haddayna ku soo Laaban Diinta, ku Noqoshada Diintoodana waxay ula Jeedaan Dadkii ka baxay ee Raacay Nabi Shucayb iyo Xaqa Illeen Nabi Shucayb marna diintooda ma haysane, ugu Dambayntii way Diideen Mu'miniintii Warkii Gaalada mar Hadduu Eebe ka koriyey, waxayna talo saarteen Eebahood kana baryeen inuu si Xaq ah ku kala Xukumo iyaga iyo Gaalada Xaqa Diiday, Taasina waxay ku Tusin inay Waajibtahay in Xaqa lagu sugnaado laguna Dhaganaado, Eebana la talo saarto isagaa Xaakim Caadil ahe oo cid walba Marin waxay Mudantahaye. Al-Acraaf (88-89).

90. Waxayna Dheheen Madaxdii Gaalowday oo Qoomkiisii ka mida haddaad Raacdaan Shucayb waa Khasaarteen.

﴿ وَقَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَوْمِهِ لَئِنِ اتَّبَعْتُمْ شُعَيْبًا إِذْ يَنْهَىكُمْ عَنْ الْحَسَبِ ﴾

91. Waxaase qabtay Gariir waxayna ahaayeen kuwo Guryahoodii ku Dhintay (Iyagoo lagdan).

﴿ فَاتَّخَذْتَهُمُ الرِّجْفَةَ فَأَصْبَحُوا فِي دَارِهِمْ جثِيئِينَ ﴾

92. Kuwii Beeniyey Shucayb waxaad Mooddaa inayna ku Nagaannin Magaaladaas Dhexdeeda, Kuwii Beeniyey Shucaybna iyaga umbaa Khasaaray.

﴿ الَّذِينَ كَذَّبُوا شُعَيْبًا كَانُوا يَرْجَعُونَ فِيهَا الَّذِينَ كَذَّبُوا شُعَيْبًا كَانُوا هُمُ الْخَاسِرِينَ ﴾

93. Markaasuu isaga Jeedsaday oo

﴿ فَتَوَلَّى عَنْهُمْ وَقَالَ يَا قَوْمِ لَقَدْ أَبْلَغْتُكُمْ رَسُولَاتٍ

iyidhi: Qoomkayow waan idin Gaadh-siiyey Farriintii Allahay, waana idiin Naseexeyey ee sideen ugu walbahaari Qoom Gaala ah.

رَبِّي وَنَصَحْتُ لَكُمْ فَكَيْفَ آسَأَ عَلَى قَوْمِ
كَافِرِينَ ﴿١٣﴾

Eebe wuxuu ka Warrami Gaalnimadooda iyo Madax adayggooda iyo waxay Dhexdabaalan oo Baadinnimo ah, iyagoo isaga Digay Raacidda nabi Shucayb oo ay Khasaare ku Sheegeen, waxaase qabatay Gariir, waxayna ku Dhinteen Guryahoodii waxaadna mooddaa inayna Xaq Diidayaashu ku Nagaanin Halkaan, Khasaarana iyaga umbuu ku Dhacay, Nabi Shucaybna wuu Isaga Jeedsaday Isagoo Sheegay inuu Gaadh-siiyey Farriintii Eebe una Naseexeyey uusanna u Murgaynin, Wax loo calaalana ma aha Cid intii Xaqa si Cad loo Gaadh-siiyey looguna Sharaxay Haddana Diidda, Dulmi, Madax adagy, Xaq diiddo iyo Dhibid Dadka Toosan iyo Xaqaba ay dhibayaan darteed. Al-Acraaf (90-93).

94. Magaalo Kasta oon Nabi u dirraba waxaan ku Qabannay Ehelkeeda Cud-durro iyo Dhibaato inay Khushuucaan (oo Baryaan Eebe).

وَمَا أَرْسَلْنَا فِي قَرْيَةٍ مِّن نَّبِيٍّ إِلَّا أَخَذْنَا أَهْلَهَا
بِالْبَأْسَاءِ وَالضَّرَّاءِ لَعَالَهُمْ بَصُرَتُّرُونَ ﴿١٤﴾

95. Markaasaan u Baddallaa meeshii Xumaan (Dhibka) Wanaag (Khayr) intay ka Bataan oy Dhahaan waxaa taabtay Aabayaalkaanno Dhibaato iyo Farax, Markaasaan ku Qabanna kado Iyagoon Ogayn.

ثُمَّ بَدَّلْنَا مَكَانَ الْمَسِيئَةِ الْمُسَبَّةَ حَتَّىٰ عَفَوْا
وَقَالُوا لَوْ أَنفَسْنَا أَبَاءَنَا الْقَوْمَ وَالسَّرَّاءَ فَأَخَذْنَاهُمْ
بِعْتَةٍ وَهُمْ لَا يُشْعُرُونَ ﴿١٥﴾

96. Hadday Dadka Magaalooyinku Rumeeyaan (Xaqa) oo Dhawrsadaan waxaan ku Furi lahayn korkooda (Sii dayn lahayn) Barakada Samada iyo Dhulka, wayse Beeniyeen (Xaqii) Waana qabanay waxay kasbanayeen Dartiis.

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ الْقُرَىٰ ءَامَنُوا وَاتَّقَوْا لَفَتَحْنَا عَلَيْهِم
بَرَكَاتٍ مِّنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ وَلَكِن كَذَّبُوا
فَأَخَذْنَاهُمْ بِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿١٦﴾

97. Miyey ka aammin Noqdeen Dadka Magaaladu inuu u Yimaaddo Dhibkan-naga Habeenkii iyagoo Hurda.

أَفَأَمِنَ أَهْلُ الْقُرَىٰ أَن يَأْتِيَهُمْ بَأْسُنَا بَيِّنًا وَهُمْ
نَائِبُونَ ﴿١٧﴾

98. Miyeyse ka aammin yihiin Dadka Magaaladu inuu u Yimaaddo Dhibkan-nagu Barqinkii iyagoo Ciyaari.

أَفَأَمِنَ أَهْلُ الْقُرَىٰ أَن يَأْتِيَهُمْ بَأْسُنَا ضَعْفَىٰ
وَهُمْ يَلْعَبُونَ ﴿١٨﴾

99. Ma waxay ka aammin Noqdeen Dhibka Eebe, cid khasaartay yaa ka aammin Noqota Ciqaabta iyo Dhibka Eebe.

أَفَأَمِنُوا مَكْرَ اللَّهِ فَلَا يَأْمَنُ مَكْرَ اللَّهِ إِلَّا
الْقَوْمُ الْخَاسِرُونَ ﴿١٩﴾

Adduunku waa Guri Imtixaam, Dadkana waxaa lagu Imtixaamaa Dhib iyo Khayrba inay Xusuustaan Eebe, haddii kale wuxuu ku qaban Eebe kado iyagoon Ogayn, Hadduu Dadku toosnaado oo Xaqa Raaco wuxuu Eebe ugu Deeqi lahaa Khayr iyo Barwaaqo, waxayse Beeniyeen Xaqii waxaana lagu ciqaabay Dambigooda Dartiis, mana habboona in laga aamin noqdo Ciqaabta Eebe Illeen waxaa suurawda in Ciqaabta Eebe u Timaaddo Habeen ay Hurdaan ama Maalin ay Ciyaari, Illeen cid Khasaartay umbaa ka Aamin Noqota oon Xil iska saarin ka Dhawrsashada Ciqaabta Eebe.

Waxaana Xadiith ah: Mu'minka Xaalkiisu waa Khayr, hadday Dhib ku dhacdo wuu samraa Khayrna wuu u Noqdaa, Hadduu Wanaag helana wuu Mahdiyyaa oo Khayr u Noqdaa, Waana in saas loo Gartaa Xaalka, Allana lagu Tiirsanaadaa. Al-Acraaf (94-99).

100. Miyeyna u Caddaannin kuwa Dhaxlaya Dhulka Ehelkiisa Ka dib haddaan doonno Waan qaban lahayn Dambigooda Dartiis, waxaannu daboolaynaa quluubtooda oyna wax Maqlin.

أَوَلَمْ يَهْدِ لِلَّذِينَ يَرِثُونَ الْأَرْضَ مِنْ بَعْدِ أَهْلِهَا
أَبَ لَوْ نَشَاءُ أَصَبْنَاهُمْ بِذُنُوبِهِمْ وَنَطْبَعُ عَلَى
قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَسْمَعُونَ ﴿٩٨﴾

101. Taasi waa Magaaloooyinkii waaxaanna kaaga qisoonaaynaa warkoodii, waxayna ula timid Rasuulladii Xujooyin mana ayan Rumayn Beenintooda darteed horay, saasuuna u Daabacaa Eebe quluubta Gaalada.

ذَلِكَ الْقَرْنِ نَقَضَ عَلَيْهِمْ مِنْ أَنْبَاءِهَا وَلَقَدْ
جَاءَهُمْ رَسُولُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَمَا كَانُوا لِيُؤْمِنُوا
بِمَا كَانُوا مِنْ قَبْلُ كَانُوا يَطْبَعُ اللَّهُ عَلَى قُلُوبِ
الْكَافِرِينَ ﴿٩٩﴾

102. Kamaannaan helin badankooda Ballan, waxaanse helay badankood iyagoo Faasiqiina.

وَمَا وَجَدْنَا لِأَكْثَرِهِمْ مِنْ عَهْدٍ وَإِنْ وَجَدْنَا
أَكْثَرَهُمْ لَفَاسِقِينَ ﴿١٠٠﴾

Eebe wuxuu halaagaa Ciddii Isla Waynaata oo Xaqa Beenisa, waxaase Habboon in Ciddii Dhaxasha ay Waajib tahay innu Toosnaado oo Hanuunsanaado si ayna ugu Dhicin Ciqaabta Eebe, sidii Qoomkii Nabi Nuux, Nabi Huud, Nabi Saalax, Nabi Luud iyo Nabi Shucayb, oo Dhammaantood Nabiyadu ula Yimaaddeen Xujooyin Cad, Badankooduna Xaqii bay Diideen, waxayna Muteen in la Daabaco Quluubtooda Fasiqiinna noqdaan, Taasina waxay Caddayn in Xaqa la Raaco, lana digtoonaado, lana Toosnaado. Al-Acraaf (100-102).

103. Markaasaan la Bixinnay Nabi Muuse Aayaadkanaga Xagga Fircoon iyo Qoomkiisii, wayna Dulmiyeen (Diideen) ee day Siday Noqotay Cidhibtii Mufsiidiinta.

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنْ بَعْدِهِمُ مُوسَىٰ بِآيَاتِنَا إِلَىٰ فِرْعَوْنَ
وَمَلَإِيْمَةٍ فَظَلَمُوا بِهَا فَأَنْظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ
الْمُفْسِدِينَ ﴿١٠١﴾

104. Wuxuuna Yidhi (Nabi) Muuse: Fircoonow Anugu Rasuul Eebaha Caalamkaan ahay.

وَقَالَ مُوسَىٰ لِفِرْعَوْنَ إِنِّي رَسُولٌ مِنْ رَبِّ
الْعَالَمِينَ ﴿١٠٢﴾

105. Waxaana Dhab ah inaan Eebe ka

حَقِيقٌ عَلَىٰ أَنْ لَا أَقُولَ عَلَى اللَّهِ إِلَّا الْحَقُّ قَدْ جِئْتُكُمْ

Sheegayn waxaan Xaq ahayn, waxaana idiin la imid Xujo Eebihiin, ee u daa Banii Israa'iil la Jirkayga.

بَيَّنَّا مِنْ رَبِّكُمْ فَأَرْسِلْ مَعِيَ بَنِي إِسْرَائِيلَ ﴿١٥٥﴾

106. Wuxuuna yidhi (Fircoon): had-daad la Timid Aayad keen haddaad Run Sheegi.

قَالَ إِنْ كُنْتَ حَتَّىٰ بِرَبِّي فَأَنْبِئْهُمْ بِمَا أَنْ كُنْتَ مِنْ الصَّادِقِينَ ﴿١٥٦﴾

107. Makaasuu Tuuray Ushiisii markaasay soo Baxday iyadoo Mas Cad ha.

فَأَلْفَىٰ عَصَاهُ فَإِذَا هِيَ ثُعْبَانٌ مُّبِينٌ ﴿١٥٧﴾

108. Wuxuuna Siibay Gacantiisii markaasay soo Baxday iyadoo u Cad Dadka Eegi.

وَنَزَعَ يَدَهُ فَإِذَا هِيَ بَيْضَاءُ لِلنَّظِيرِينَ ﴿١٥٨﴾

Nabi Muuse wuxuu Eebe u diray Fricoon iyo Qoomkiisii isagoo Aaydo wata, wayse Beeniyeen oo diideen, wuxuuna u sheegay Fricoon inuu Rasuul Eebe yahay, Dhabna waxaan Xaq ahayn uusan Sheegayn, Xujana uu la yimid uuna warsaday inuu u Daayo Banii Israa'iil, wuxuuse Codsaday Fircoon sidii Caadada u ahayd inuu Xujo Keeno hadduu Run Sheegi, wuxuuse u Muujiyey Ushii oo Mas Noqotay iyo Gacantiisa oo Cad Cudur la'aan.

Qisaduna saasay ku socotaa inta laga halaago Fircoon iyo Colkiisii Xumaa. Al-Acraaf (103-108).

109. Waxay dheheen Madaxdii qoomka Fircoon ka mid ahayd kani waa sixir-roow aad u yaqaanna.

قَالَ الْمَلَأُ مِنْ قَوْمِ فِرْعَوْنَ إِنَّ هَذَا لَسِحْرٌ عَلِيمٌ ﴿١٥٩﴾

110. Wuxuuna Dooni inuu idinka Bi-xiyo Dhulkiinna ee Maxaad Faraysaan.

يُرِيدُ أَنْ يُخْرِجَكُمْ مِنْ أَرْضِكُمْ فَمَاذَا تَأْمُرُونَ ﴿١٦٠﴾

111. Waxayna Dheheen dib u Dhig (Xaalkiisa) iyo Walaalkiis, una dir Magaalooyinka kuwo soo kulmiya.

قَالُوا أَرْجِهْ وَأَخَاهُ وَأَرْسِلْ فِي الْمَدَائِنِ حَاشِرِينَ ﴿١٦١﴾

112. oo kuu Keena Sixir badane kasta aadna u yaqaanna.

يَأْتُوكَ بِكُلِّ سِحْرٍ عَلِيمٍ ﴿١٦٢﴾

113. Waxayna u Yimaaddeen Sixir-layaashii Fircoon, waxayna Dheheen Ujuuro maleennahay haddaan annagu Adkaanno.

وَجَاءَ السَّحَرَةُ فِرْعَوْنَ قَالُوا إِنَّ لَنَا لَأَجْرًا إِنْ كُنَّا نَحْنُ الْغَالِبِينَ ﴿١٦٣﴾

114. Wuxuuna yidhi: haa, waxaadna noqonaysaan kuwa la soo Dhaweyyo.

قَالَ نَعَمْ وَإِنَّكُمْ لَمِنَ الْمُقَرَّبِينَ ﴿١٦٤﴾

115. Waxayna dheheen: Muusow ama Tuur ama aan tuurro.

قَالُوا بُنْمُوسَىٰ إِمَّا أَنْ تُلْفَىٰ وَإِمَّا أَنْ نَكُونَ مَكْفُورِينَ ﴿١٦٥﴾

116. Wuxuuna yidhi: Tuura, markay Tuureenna waxay Sixreen Indhaha

قَالَ الْفَوْقُ أَلَمَّا الْفَوْسِحُ وَرَأَىٰ عَصَىٰ آلِ مُوسَىٰ

Dadka, wayna Cabsi galiyeen waxayna la yimaaddeen Sixir wayn.

وَأَسْرَهُمْ بِهٖمْ وَجَاءَهُمْ وَسِحْرٍ عَظِيمٍ ﴿١١٦﴾

Saasaad u aragtaa markuu Dambiile Fircoon Xaqii Beeniyey inuu Madaxdii Ka ag dhawaydna ay ku raaceen Beenintii iyagoo ku sheegi Nabi Muuse inuu Dooni inuu Dadka Dhulka ka Bixiyo Taasoo ay rabeen inay Dadka Khaldaan, waxayna Dadkii ku Dheheen wax na fara idinkaan idinka amar qaadanaynaaye, waxayna u soo Jeediyeen in la sugo Muuse iyo Walaalkii, Dadka la soo kulmiyo Cid kastoo Sixir Taqaanna Timaaddo, wayna u Yimaaddeen Fircoon Iyagoo warsan Ujuuro hadday Adkaadaan, wuxuuna ugu yaboohay Ujuuro iyo waliba u Dhawaansho, waxayn Tuureen wax ay Indhaha Dadka ku Sixreen kuna Cabsi galiyeen oo wayn. Taasina waxay ku Tusin Xaalkii Fircoon iyo Colkiisii ee Xumaa Khaldanaana. Al-Acraaf (109-116).

117. Waxaanna u Waxyoonaay (Nabi) Muuse: Tuur Ushaada, waxaana soo Baxday inay Cunto waxay Dhoobdhoo-been.

* وَأَوْحَيْنَا إِلَىٰ مُوسَىٰ أَنْ أَلْقِ عَصَاكَ فَإِذَا هِيَ تَلْقَفُ مَا يَأْفِكُونَ ﴿١١٧﴾

118. Waxaana Sugnaaday Xaqii, waxaana Buray waxay Falayeen.

فَوَقَّعَ الْحَقُّ وَيَطَّلِمَا كَانُوا يَمْعُرُونَ ﴿١١٨﴾

119. Waxaana lagaga Adkaaday Gaa-ladii halkaas, waxayna noqdeen iyagoo Dullaysan.

فَعَلَبُوا هُنَالِكَ وَانْقَلَبُوا صَبِيرِينَ ﴿١١٩﴾

120. Waxaana loo riday Sixirlayaashii Sujuud.

وَأَلْقَى السَّحَرَةَ سَاجِدِينَ ﴿١٢٠﴾

121. Waxayna Dheheen waxaan Rumeynay Eebaha Caalamka.

قَالُوا يَا أُمَّةَ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿١٢١﴾

122. Eebaha Muuse iyo Haaruun.

رَبِّ مُوسَىٰ وَهَارُونَ ﴿١٢٢﴾

123. Wuxuuna yidhi Fircoon: Miyaad rumeeyeen Muuse, intaanan idiin idmin ka hor, Arrintani waa Dhagar aad ku Dhagarteen Magaalada si aad uga Bixisaan Xaggeeda Dadkeeda, waad ogaan doontaan.

قَالَ فِرْعَوْنُ يَا مَعْشَرَ بَنِي إِسْرَائِيلَ لَا تُكْفِرُوا هَذَا الْمَكْرُ مَكْرُ ثَمُودَ فِي الْمَدِينَةِ لِيُخْرِجُوا مِنْهَا أَهْلَهَا فَسَوْفَ تَعْمُرُونَ ﴿١٢٣﴾

124. Waxaan u goyn Gacmihiinna iyo lugahiinna isdhaaf, waana idin Wadhi Dhamaantiin.

لَا قُطَيْعَنَّ أَيْدِيكُمْ وَأَرْجُلُكُمْ مِمَّنْ خَلْفَ دَرِّ الْأَصْلَابِ كُلُّ أُمَّةٍ ﴿١٢٤﴾

125. Waxayna Dheheen Xagga Eebahannaan u Noqonaynaa.

قَالُوا إِنَّا إِلَىٰ رَبِّنَا مُنْقَلِبُونَ ﴿١٢٥﴾

126. Ma jiro Waxaad nagu nacayso oon ahayn inaan Rumaynay Aayaadka Eebahanno, markay noo yimaaddeen,

وَمَا تَقْتُمْ مِنَّا إِلَّا أَنْ ءَامَنَّا بِآيَاتِ رَبِّنَا لَمَجَاءَةً تَنَا رَبَّنَا أَفَرِحَ عَلَيْنَا صَبْرًا وَتَوَقَّعْنَا مُسْلِمِينَ ﴿١٢٦﴾

Eebow samir naga Buuxi na dilna annagoo Muslimiina.

Waxaa Sugnaaday Xaqii Xumaantiina waa Burtay, Gaaladiina waa laga Adkaaday iyagoo Dullaysan, Sixirlayaashina way Rumeeyeen Xaqii, wuxuuse ku Guul guulay Fircoon Arrintaas, wuxuuna sheegay inay rumeeyeen Xaqa Isagoon u idmin, wuxuuna ugu gooddiyey inuu Ciqaabi oo Gooyn Gacmaha iyo Lugaha, Wadhina, wayse Calool adaygeen, Eebana warsadeen Samir iyo Adkaysi Illeen waxaan Xaqa Rumayntiis ahayn Fircoon kuma Nicine, Kuna oofsado Eebe iyagoo Muslimiina. Waana kaas Xaqa iyo Xumaan Waligeed, waana kaas Fircoon iyo Isla waynidiisii, waana kaas Xaq oo lagu sugnaado iyo Rumayn aayaadkiisa Dhaba. Al - Acraaf (117 - 126)

127. Waxay Dheheen Madaxdii oo Qoonkii Fircoona: ma ku Dayn Muuse iyo Qoomkiisa inay Fasaadiyaan Dhulka oo uu isaga tago (Muuse) adiyoo ILaahyadaada aad caabudayso. wuxuna yidhi waxaannu Dili Wiilashooda waxaannu dayn Gabdhahooda, anna-gaana ka sarrayna oo Dullayn.

وَقَالَ الْمَلَأَمِينَ قَوْمِ فِرْعَوْنَ أَتَدْرُسُونِي وَقَوْمَهُ
لِيَفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ وَيَذَّبِكَ وَيَالِهِتِكَ قَالَ سَتَقْتُلُونَ
أَبْنَاءَهُمْ وَتَسْتَحْيِي نِسَاءَهُمْ وَإِنَّا فَوْقَهُمْ
قَاهِرُونَ ﴿١٢٧﴾

128. Muusana wuxuu ku yidhi Qoomkiisa: Kaalmaysta Eebe, samrana, Dhulka Eebaa iska leh, wuxuuna dhaxalsiin Cidduu doono oo addoomadiisa ka mida, Cidhibta (Fiicanna) waxaa iska leh Kuwa Dhawrsada.

قَالَ مُوسَى لِقَوْمِهِ اسْعَبُوا بِاللَّهِ وَاصْبِرُوا إِنَّ
الْأَرْضَ لِلَّهِ يُورِثُهَا مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ وَالْعَاقِبَةُ
لِلْمُتَّقِينَ ﴿١٢٨﴾

129. Waxayna ku dhaheen waa nala Dhibay ka hor Imaatinkaaga iyo ka dib Imaatinkaaga, wuxuuna (Nabi Muuse) ku Yidhi waxay u Dhawdahay in Eebihiin halaago Cadawgiinna oo Dhulka idinku reebo si uu u Eego waxaad Fashaan.

قَالُوا أُوذِينَا مِنْ قَبْلِ أَنْ تَأْتِيَنَا وَمِنْ بَعْدِ مَا
جِئْتَنَا قَالَ عَسَى رَبُّكُمْ أَنْ يُهْلِكَ عَدُوَّكُمْ
وَيَسْتَخْلِفَكُمْ فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرَكُمْ كَيْفَ
تَسْمَعُونَ ﴿١٢٩﴾

Madaxdii Xumayd ee Fircoon Ka ag Dhawayd waxay Fircoon u jeediyeen arrin ah ma waxaad dayn Muuse iyo Qoomkiisa inay Fasaadiyaan Dhulka adna ay kaa Daayaan cibaadada, ILaahyadaana aanay caabudin, waxaana la sheegay in Fircoon lahaa ILaahyo uu qarsoodi kaa Caabudi jiray, wuxuuse ugu Jawaabay waxay rabeen oo ah inuu Muuse iyo Qoomkiisa ka Adagayahay kana sarreeyo, waana faan Jaahil aan wax garanayn.

Nabi Muuse isagu wuxuu u Jeedsaday Xagga Eebe wuxuuna faray Qoomkiisa inay Kaalmaystan Eebe Samraanna Ogaadaanna in Dhulka Eebe leeyahay una reebi Cidduu doono oo Addoomadiisa ka mida, Cidhibta Fiicanna ay yeelan kuwa dhawrsada, waxaase Calaacalay Qoomkiisii oo sheegay in mar kasta la Dhibay, wuxuuna ku Calool adkaysiiyey inay u dhawdahay in Eebe Halaago Cadowgooda oo Dhulka iyaga u reebo Imtixaan dartiis iyo inuu Eego waxay falaan, waana taas Xaqa iyo Xumaan iyo Mu'min iyo Gaal Xaalkiisu. Al - Acraaf (127 - 129).

130. Waxaan ku qabannay Fircoon Ehelkiisii Abaar iyo Nusqaan Midhaha, inay wax Xusuustaan.

وَلَقَدْ أَخَذْنَا آلَ فِرْعَوْنَ بِالسِّنِينَ وَنَقْصِ مَتِّ
الْتَمَرَاتِ لَعَلَّهُمْ يَدْكَرُونَ ﴿١٣٠﴾

131. Hadduu Wanaag u Yimaaddo waxay Dhahaan anaa leh tan (Mudan), hadday Dhibaato ku Dhacdana waxay sharaystaan Muuse iyo inta la jirta, Baaskoodu wuxuu uun jiraa Eebe Agtiisa, badankooduse ma Oga.

فَإِذَا جَاءَهُمْ الْحَسَنَةُ قَالُوا لِنَاهِلُوهُ وَإِنْ ضُيِّقَهُمْ
سَيِّئَةٌ يَنْظُرُوا بِمُوسَى وَمَنْ مَعَهُ وَالْآيَاتِ
ظَلَمْتَهُمْ عِنْدَ اللَّهِ وَالْكَافِرِينَ أَكْرَمَهُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٣١﴾

132. Waxayna dheheen wax kasta oo aayad ah ood noola timaaddo inaad nagu Sixirto anagu Kuma rumaynayno.

وَقَالُوا هَمَّا تَتَّبِعُوهُ مِنْ آيَاتِهِ لَنَسْحَرَنَّ بِهَا مَا
نَحْنُ لَكَ بِمُؤْمِنِينَ ﴿١٣٢﴾

133. Markaasaan ku Dirray Daad, Ajax, injir iyo Rah iyo Dhiig aayaad Cad iyagoo ah, wayna iskibriyeen waxayna ahaayeen Qoom Dambilayaal ah.

فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمُ الطُّوفَانَ وَالْجَرَادَ وَالْقُمَّلَ
وَالصَّفصَافِءَ وَالْدَّمَاءَ الَّتِي يُفَصِّلُهَا فَاسْتَكْبَرُوا
وَكَانُوا قَوْمًا مُجْرِمِينَ ﴿١٣٣﴾

134. Markuu ku Dhacay Korkooda Cadaabku waxay dheheen: Muusow noo Bari Eebahaa wuxuu kugula Ballamay, haddaad naga fayddo Cadaabka wannu ku Rumayn, waxaana la diri (u dayn) la jirkaaga Banii Israa'iil.

وَلَمَّا وَقَعَ عَلَيْهِمُ الرِّجْزُ قَالُوا لِمُوسَى اذْعُ لَنَا رَبِّكَ
بِمَا عَاهَدْتَ عِنْدَكَ لَنْ نَسْفُتَ عَنَّا الرِّجْزَ
لَنُؤْمِنَ بِكَ وَالرِّسَالِ مَعَكَ بِنِي إِسْرَائِيلَ ﴿١٣٤﴾

135. Markaan ka faydnay Cadaabkii tan iyo Muddo ay Gaadhayaan yey ahaadeen kuwo Buriya (Ballankii).

فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُمْ الرِّجْزَ إِلَى أَجَلٍ هُمْ يَبْلُغُونَ
إِذَا هُمْ بِسَكُونٍ ﴿١٣٥﴾

Eebe wuxuu ku qabtay Fircoon iyo Qoomkiisii Abaar iyo Beerihii oo ka Nusqaamay Bal inay Waantoobaan, Waxaase dhacday in marka Wanaag u yimaadana ay Sheegtaan inay Mudan yihiin, haddii Xumaani Taabatana ay Baasaystaan Nabi Muuse iyo inta la jirta, mase oga in Dhibaataadu uga imaan Xagga Eebe, markaasay caddeeyeen warkii oo u Sheegen Nabi Muuse iyo Dadkii Rumceyey wax kasta oo calaamada oo loo keeno inayna Rumaynayn, Markaasaa Eebe ku sii daayey Daad, Cayayaan, Rah, Ajax iyo Dhiig oo ah Calaamooyin Cad cad, wayse iska kibriyeen, waxayna noqdeen Dambilayaal, Markuu dhibku ku Dhacayna waxay u Sheegeen Nabi Muuse in Haddii Dhibka laga fayddo ay Rumayn Xaqa, wayse Becniyeen Ballankii.

Taasina waxay ku tusin Awoodda Eebe iyo siduu wax u Ciqaabo, iyo Xumaanta Gaalada iyo Madax adaygooda, waxaase habboon in Xaqa la Raaco. Al-Acraaf (130-135).

136. Waan ka aarsannay Gaaladii waxaanna ku Maanshaynay Badda, Illeen waxay beeniyeen Aayaadkanaga, wayna Halmaameen.

فَأَنْقَمْنَا مِنْهُمْ فَأَغْرَقْنَاهُمْ فِي الْيَمِّ بِأَنَّهُمْ كَذَّبُوا
بِآيَاتِنَا وَكَانُوا عَنْهَا غَافِلِينَ ﴿١٣٦﴾

137. Waxaanna Dhaxalsiinnay Qoomkii ahaa kuwa la dullaysto Bariga Dhulka (shaam) iyo Galbeedkiisa een barakaynay Dhexdiisa, wayna u Dhammaatay Kalimada (Yaboohee) Eebahaa ee wanaagsanaa Banuu Israa'iil samirkoodii Dartiis. Waxaana Baabi'innay wuxuu Samaynayey Fircoon iyo Qoomkiisii iyo waxay Dhisayeen.

وَأَوْرَثْنَا الْقَوْمَ الَّذِينَ كَانُوا يُسْتَضَمُّونَ
مَشْرِقَ الْأَرْضِ وَمَغْرِبَهَا الَّتِي بَدَرْنَا فِيهَا وَتَمَّتْ
كَلِمَتُ رَبِّكَ الْحُسْنَىٰ عَلَىٰ بَنِي إِسْرَائِيلَ بِمَا
صَبَرُوا وَدَمَرْنَا مَا كَانَ يَصْنَعُ فِرْعَوْنُ وَقَوْمُهُ
وَمَا كَانُوا يَعْرِشُونَ ﴿١٣٧﴾

138. Waxaana Tallaabinay Banuu Israa'iil baddii waxayna u Yimaadeen Qoom ku Nagi Sanamyadoodii markaasay dheheen: Muusow Noo yeel Ilaah siday iyaba Ilaahyo u yeesheen wuxuuna ku Yidhi: idinku waxaad tihiin Qoom Jaahiliina.

وَجَوْرًا بِنَايِبِي إِسْرَائِيلَ يَدِ الْبَيْحَرِ فَأَتَوْا عَلَىٰ قَوْمٍ
يَعْبُدُونَ عَلَىٰ غُلُوبِهِمْ أَلْوَالِيًّا يَمْشُونَ
أَجْعَلْ لَنَا إِلَهًا كَمَا لَهُمْ آلِهَةٌ أَفَلْ
إِنَّا كُمْ قَوْمٌ تَجْهَلُونَ ﴿١٣٨﴾

139. Kuwaas waa lagu Halaagi waxay ku suganyihiin waana Baadil waxay fali.

إِن هَؤُلَاءِ مِمَّنَّ مَاتَهُمْ فِيهِ وَيَطَّلُ مَا كَانُوا
يَعْمَلُونَ ﴿١٣٩﴾

Eebe wuxuu ka warrami in markay Gaaladu Madax adaygeen Xaqii uu Halaagay, Baddana ku Maansheeyey, Fircoon iyo Qoomkiisiina saasay ku halaagsameen, waxaana dhulkii ku soo hadhay Dadkii la Dullaysan jiray, wayna Dhaxleen Dhulkii Barakaysnaa, waxaana la halaagay Fircoon iyo Qoomkiisii iyo waxay Dhisayeen, waxaase Dhacay in kuwii Jaahiliinta ahaa ee Banuu Israa'iil ay warsadeen Nabi Muuse inuu ilaahyo u Yeelo sida kuwa ay arkeen oo Caabudayey Sanamyo, una Sheegay inay Jaahiliin yihiin, waxay kuwaasu falina Khasaare iyo Baadhil yahay, waxaa sugnaatay in dad u Yimaadeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Kuna Dhaheen: noo Samee Geed sida Gaaladu u Leedahay Geed ay hubkana ku Xoqdaan. Markaasuu Yidhi Eebaa wayn waa waxay ku dhaheen Banii Israa'iil Nabi Muuse Ilaah noo yeel siday Ilaah u leeyihiin, waxaad qaadaysaan Jidkii kuwii hore, Taasina waxay Muujin in Xaqa layskaga daydo ee aan Xumaan iyo Dambi layska raacin layskagana dayanin. Al-Acraaf (136-139).

140. Wuxuu yidhi ma wax Eebe ka soo hadhay yaan Ilaahnimo idiinka doonaa isagoo idinka Fadilay Caalamkan (Joo-ga).

قَالَ أَعْرَبَ اللَّهُ أَعْيَاكُمْ إِلَهًا وَهُوَ فَضَّلَكُمْ عَلَى
الْعَالَمِينَ ﴿١٤٠﴾

141. Xusuusta markaan idinka Korinnay Fircoon Dadkiisii iyagoo idin dhadhansiiyey Cadaab Xun, oo laynayey Wiilashiinna daynayeyna Gabdhihiinna, Arrintaasna waxaa ku Sagan Ibtalo Eebihiin Xaggiisa ka ahaatay oo wayn.

وَإِذْ أَمَرْنَاكُم مِّنْ أَلْفِ فِرْعَوْنَ يَسْمُونَكُمْ كُرْسُوةً
الْعَذَابِ يُفْتَلُونَ أَبْنَاءَكُمْ وَمَيْسَتِ حَيَوْنَ
نِسَاءَكُمْ وَفِي ذَٰلِكُمْ بَلَاءٌ مِّنْ رَبِّكُمْ
عَظِيمٍ ﴿١٤١﴾

142. waxaan u yaboohnay Nabi Muuse Soddan habeen waxaana ku dhammaystirray Toban, wuxuuna ku dhammaaday Ballankii Eebihis Afartan Habeen, wuxuuna ku yidhi Nabi Muuse Walaalkiis Haaruun iiga dambee Qoomkayga Wanaajina hana raacin Jidka Mufsiidiinta.

*وَوَاعَدْنَا مُوسَى ثَلَاثِينَ لَيْلَةً وَأَتَمَمْتَنَاهَا بِعَشْرِ فَرَسَاتٍ مِّنْ رَبِّهِ ۗ أَرْبَعِينَ لَيْلَةً وَقَالَ مُوسَى لِأَخِيهِ هَارُونَ أَخْلِفْنِي فِي قَوْمِي وَأَصْلِحْ وَلَا تَتَّبِعْ سَبِيلَ الْمُفْسِدِينَ ﴿١٤٢﴾

Wuxuu Xusuusiyey Nabi Muuse Qoomkii Nicmooyinka Eebe iyo siduu Fircoon uga koriyey isagoo Wiilashana laynayey, Gabdhahana daynayey si uu u Dullaysto, Markaasaa Eebe u Yaboohay Nabi Muuse Kitaabkii Tawreed, siiyeyna Muddo Afartan Habeen si Eebe la hadalkiisa ugu darbado, waxaana Intaas la sii Joogay Dadkii Walaalkiis Nabi Haaruun oo uu u dardaarmay inuu Wanaajiyi Dadka Xumaanna ku Raacin.

Taasina waxay ku Tusin in Khayrka laysku baraarujiyo, Illeen Haaruunba Nabi buu ahaaye. Al-Acraaf (140-142).

143. Markuu u Yimid Nabi Muuse Ballankannagii oo la hadlay Eebihis wuxuu yidhi: Eebow is kay tus aan ku arkee, wuxuuna yidhi Eebe: ima arkaysid ee day Buurta Hadday Meesheeda ku sugnaato markaasaad i arki, markuu Eebe u Daahiray Buurtii wuxuu ka yeelay Burbur waxaana dhacay Nabi Muuse suuxdin Darteed, markuu miyirsadayna wuxuu Yidhi: (Eebow adaa) Nasahan waan kuu Toobad keenay waxaan ahay Mu'miniinta kan ugu horreeya (waqtigan inaan Adduunka lagugu arkayn).

وَلَمَّا جَاءَ مُوسَى لِمِيقَاتِنَا وَكَلَّمَهُ رَبُّهُ قَالَ رَبِّ أَرِنِي أَنْظُرَ الْجَبَلَ ۖ قَالَ لَنْ نَرَنِي ۖ وَلَكِنْ أَنْظُرْ إِلَى الْجَبَلِ فَإِنِ اسْتَقَرَّ مَكَانَهُ فَسَوْفَ تَرَاهُ ۚ فَلَمَّا تَجَلَّى رَبُّهُ لِلْجَبَلِ جَعَلَهُ دَكًّا وَخَرَّ مُوسَى صَوْعًا فَلَمَّا أَفَاقَ قَالَ سُبْحَانَكَ بُنْتُ إِلَيْكَ وَأَنَا أَوَّلُ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٤٣﴾

144. Wuxuu Yidhi Eebe: Muusow waxaan kaa doortay Dadka (Sabankan) Diriddayda iyo lahadalkayga Dartiis ee qaado waxaan ku siiyey ahowna kuwa Mahdiya.

قَالَ يَمْوَسَىٰ إِنِّي اصْطَفَيْتُكَ عَلَى النَّاسِ بِرِسَالَاتِي وَبِكَ لِمَ أَفْضَلُ مَا آتَيْتُكَ وَكُن مِّنَ الشَّاكِرِينَ ﴿١٤٤﴾

145. Waxaan ugu qorray alwaaxda wax kastoo wacdi iyo Caddayna, ee ku qaado Niyadadag farna Qoomkaaga inay qaataan, ha qaataan Teeda Fii-cane, Waxaan idin tusin Guryihii Faa-siqiinta.

وَكَتَبْنَا لَهُ فِي الْأَلْوَابِ مِنْ كُلِّ شَيْءٍ مَّوعِظَةً وَتَفْصِيلًا لِّكُلِّ شَيْءٍ ۖ فَخَذُّهَا يُعْقُورُ ۖ وَأَمَرَ قَوْمَكِ بِالْأُخْذِ بِهَا حَسَنًا ۚ وَأُورِيكُمْ دَارَ الْفَاسِقِينَ ﴿١٤٥﴾

Nabi Muuse markuu ku Yimid Muddadii oo Eebe la hadlay yuu ka Baryey inuu Arko, Eebese sarreeye wuxuu u sheegay inuusan arkayn, markuu Buurtii u Daahirayna ay Burburtay, Nabi Muusana Suuxay markuu miyirsadayna uu wayneeey Eebe oo Nasahay, markaas Eebe Xusuusiyey siduu u Doortay uuna faray inuu qabsado waxa loo waxyoooday ee waanada iyo Caddaynta ah, qoomkiisana faro inay aad u qabsadaan, wuxuuna Tusay Guryihii kuwii Faasiqiinta ahaa ee la Halaagay.

Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalayo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dadku way Suuxi Qiyaamada anana u soo hor miyirsan markaasaan Arkaa Nabi Muuse oo Carshiga haysta, marka ma ogi inuu hortay soc Miyirsaday iyo inuu ka mid yahay kuwa Eebe ka soo Reebay, Taasina waxay ku Tusin Sharafta Nabigeenna iyo Nabi Muusaba, iyadoo Nabiyaduba, Sharaf wada leeyihiin. Al-Acraaf (143-145).

146. Waxaan ka Iilaa Aayaadkayga kuwa isku Kibriya Dhulka Xaq darro, hadday arkaan Aayad kasta ma Ru-meeyaan hadday arkaan Jidka Hanuunka kama Yeeshaan Waddo, hadday Arkaan Waddada Baadidana waxay ka yeeshaan Jid, waxaana ugu Wacan inay Beeniyeen Aayaadkannaga oy ahaayeen kuwo Halmaamay.

سَأَصْرِفُ عَنْ آيَاتِ الَّذِينَ تَتَكَبَّرُونَ فِي الْأَرْضِ
عَدِيمِ الْحَقِّ وَإِن يَرَوْا كَلِمَةَ آيَةٍ أَلَّا يُوْمَرُوا بِهَا
وَإِن يَرَوْا سَبِيلَ الرُّشْدِ لَا يَتَّخِذُوهُ سَبِيلًا
وَإِن يَرَوْا سَبِيلَ الْغَيِّ يَتَّخِذُوهُ سَبِيلًا ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ
كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَكَانُوا عَنْهَا
عَنفِيلِينَ ﴿١٤٦﴾

147. Kuwa Beeniyeen Aayaadkannaga iyo la Kulankannaga Aakhiro waxaa Buray Camalyaalkooda, Miyaase laga abaal mariyaa waxay Camal falayeen Mooyee.

وَالَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَلِقَاءِ الْآخِرَةِ حَبِطَتْ
أَعْمَالُهُمْ هَلْ يُجْرُونَ إِلَّا مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٤٧﴾

148. Waxay ka Yeesheen qoomkii Nabi Muuse Gadaashiis Jawhartoodii Dibi Cod leh, miyeyna arkaynin inuusan lahadlaynin kuna Toosinaynin Jid, way Yeesheen iyagoo Daalimiin ah.

وَاتَّخَذَ قَوْمُ مُوسَىٰ مِنْ بَدْوِهِمْ خُلَيْفَةً
جَسَدًا لَهُ خُورٌ أَلْمِيزٌ إِنَّهُ لَآيَكُلَمُهُمْ
وَلَا يَهْدِيهِمْ سَبِيلًا اتَّخَذُوهُ وَكَانُوا
ظَالِمِينَ ﴿١٤٨﴾

149. Marki ay shallaayeen (Nidaamooden) oy arkeen inay Dhumeen waxay Dhaheen Hadduusan noo Naxariisan Eebaheen oosan noo Dambi Dhaafin waxaan Noqonaynaa kuwo Khasaara.

وَلَمَّا سَوَّطَ فِي أَيْدِيهِمْ وَرَأَوْا أَنَّهُمْ قَدَّضَلُوا
قَالُوا لَيْن لَّمْ يَرْحَمْنَا رَبُّنَا وَيَغْفِرْ لَنَا لَتَكُونَنَّ
مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿١٤٩﴾

Xaqa waxaa laga Leexin kuwa iskibriya oon Xaqa Rumayn, hadday Xumaan arkaana Raaci, Illeen waxay Beeniyeen oo Halmaameen Aayaadka Eebe, kuwa Beeniya Aayaadka Eebe iyo la Kulankiisana waxaa Buri Camalkooda. Sufyaan Binu Cuyeyna wuxuu Yidhi: Waxaa laga siibay Fahminta Quraanka markaasaa laga Leexiyey.

Aayadaha kale waxay ka warrami in Qoomkii Nabi Muuse intuu ka Maqnaa ka yeesheen Dibi waxay Caabudaan, waana Doqonnimo Illeen wax ma taree, markay arkeen inay Khasaareenna waxay Sheegeen haddaan Eebe u Dhaafin una Naxariisan inay Dhab u Khasaareen. Al-Acraaf (146-149).

150. Markuu ku soo Noqday Nabi

وَلَمَّا رَجَعَ مُوسَىٰ إِلَىٰ قَوْمِهِ غَضْبَانَ أَسِفًا قَالَ بِئْسَمَا

Muse qoomkiisii isagoo Cadhaysan oo Walbahaarsan wuxuu yidhi waxaa Xun Waxaad iiga dambeyseen Gadaashay, ma waxaad Dadajiiisateen Amarkii Eebihin, wuxuuna Tuuray Alwaaxdii, wuxuuna Qabtay Madaxa Walaalkiiss Isagoo Xaggiisa u Jiidi, wuxuuna Yidhi: Ina Hooyoow qoomku way i tabaryaraysteen waxayna u dhawaadeen inay in Dilaan ee ha igaga farxin Colka hana iga yeelin la Jirka Qoomka Daalimiinta ah.

خَلَقْتُمُونِي مِنْ بَعْدِي أَعْلَيْتُمْ أَمْرِي رَيْبِكُمْ وَأَلْقَى
الْأَلْوَابَ وَأَخَذَ بِرَأْسِ أَخِيهِ يَجُرُّهُ إِلَيْهِ قَالَ ابْنَ أُمَّ إِنَّ
الْقَوْمَ اسْتَزْعَفُونِي وَكَادُوا يَقْتُلُونَنِي فَلَا
تُشْمِتْ بِيَ الْأَعْدَاءَ وَلَا تَجْعَلَنِي مَعَ الْقَوْمِ
الظَّالِمِينَ ﴿١٥٠﴾

151. Wuxuuna yidhi Nabi Muuse: Eebow u Dambi Dhaaf ani iyo Walaalkay nana gali Naxariistaada adaa Naxariis badane ahe.

قَالَ رَبِّ اغْفِرْ لِي وَلِإِخِي وَأَدْخِلْنَا فِي رَحْمَتِكَ وَأَنْتَ
أَرْحَمُ الرَّاحِمِينَ ﴿١٥١﴾

152. Kuwa Yeeshay Dibi waxaa Gaadhi Cadho Eebahood iyo Dulli Nolosha adduunyo, saasaanna ku Abaal marinnaa Been abuurayaasha.

إِنَّ الَّذِينَ اتَّقَوْا وَالَّذِينَ هُمْ عَنْ آلِهِمْ وَوَالِدَيْهِمْ
وَزُرِّيَّتِهِ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَكَذَلِكَ نَجْزِي
الْمُتَّقِينَ ﴿١٥٢﴾

153. Kuwa Falay Xumaan Markaas Toobad keenay intaas ka dib oo Rumeeeyey Xaqa Eebahaa intaas ka dib waa Dambi Dhaafe Naxariista.

وَالَّذِينَ عَمِلُوا السَّيِّئَاتِ ثُمَّ تَابُوا مِنْ بَعْدِهَا
وَأَسْأَلُوا أَنْ يُرْسَلُوا وَيُخَذَ لَهُمْ حَبِيبٌ ﴿١٥٣﴾

Markuu Nabi Muuse ku soo Noqday Qoomkiisii isagoo Cadhaysan oo ka Walbahaarsan waxay faaleen wuxuu ku yidhi: Waxaa Xun waxaad iiga Dambeyseen, ma waxaad Dedejisaateen Amarkii Eebe, wuxuuna Cadho la Tuuray Alwaaxdii, wuxuuna Madaxa qabtay Walaalkiis Haaruun oo uu ku Dhaafay Gadaashii wuuna Jiday.

Markaasuu Calaacalay oo ku Yidhi ina Hooyo Madaxa hay qabannin, qoomkii way i Liideen ina Dili Gaadheen, Colka ha igaga Farxin, Daalimiintana haygala mid Dhigin, Markuu ogaaday inuu walaalkii Dambi la'aan yahay yuu u Dambi Dhaaf warsaday Naftiisa iyo Walaalkiis.

Kuwa dibiga caabuday Alla wuu u cadhooday oo dulleeyey Waana Abaalka Been abuurayaasha, Ciddiise Xumaan Fasha oo Toobad keenta oo Xaqa Rumaysa Eebe wuu u Dambi Dhaafi.

Abuu Qilaabo wuxuu Yidhi: Waxaa Dulli Mudan Been Abuurte oo Dhan. Al-Acraaf (150-153).

154. Markay Cadhadu ka Xasishay Nabi Muuse wuxuu Qaatay Alwaaxdii waxaana ku qorraa hanuun iyo Naxariis u ah kuwa Eebahood ka Cabsan.

وَلَمَّا سَكَتَ عَنْ مُوسَى الْفَضْفَضَ أَخَذَ الْآلْوَابَ وَفِي
نُحُوتِهَا هَدَىٰ وَرَحْمَةً لِّلَّذِينَ هُمْ لِرَبِّهِمْ
يَرْهَبُونَ ﴿١٥٤﴾

155. Wuxuu ka Doortay Nabi Muuse Qoomkiisa Toddobaatan Nin Ballan-

وَأَخَذَ مَوْسَىٰ بَعْمَهُ سَبْعِينَ رَجُلًا لِّمِيقَاتِنَا فَلَمَّا

kannaga Dartiis, markay qabatay Gariirku wuxuu Yidhi: Eebow haddaad Doonto waad halaagi lahayd horay iyaga iyo Anigaba, ma waxaad noo halaagi waxay faleen Sufaho naga mida, waa Imtixaankaaga, Ciddaad doontana waad Dhumisaa, kaad dontana waad hanuunisaa, adaa Wali noo ah ee noo Dambi Dhaaf, noona Naxariiso, adaa Dambi Dhaafkaagu Khayr roon yayhay oo badan yahay.

156. Noona qor adduunyadan Wanaag iyo Aakhiraba waannu kuu noqonnaye, wuxuu Yidhi Cadaabkaygu wuxuu ku dhici Ciddaan Doono, Noxariistayduna waxay u Waasac Noqotay wax kasta, waxaana u qori kuwa Dhawrsada oo Bixiya Zakada iyo Kuwa Aayaadkay-gana Rumeeyaa.

Markay Cadhadii ka Ba'day Nabi Muuse wuxuu qaatay Looxdii oo hanuun iyo Naxariis ku qorantahay, kuna waantoobi Ciddii Cabsan, wuxuuna Doortay Toddobaatan Qoomkiisii ka mida inay Eebe u Toobadkeenaan, markuu Gariirkii qabtayna wuxuu ku calaalay in hadduu Eebe doono uu halaagi lahaa mar hore, Haddase ma waxaa naloo Halaagi wax kuwo Xun oo Naga mida faleen, Eebow waa Imtixaamkaagii, Ciddaad Doontana waad Dhumisaa taad Doontana waad hanuunisaa, adaaana wali noo ah, ee noo Dambi Dhaaf noona Naxariiso, adaa Dambi Dhaafe Khayr roon ahe, noona qor adduun iyo Akharaba Wanaag, waan kuu Toobad keennaye, wuxuuna u sheegay Eebe inuu Cadaabkiisu ku Dhici Cidduu Doono, naxariistiisuna wax kasta u Waasac tahay, Khayrna mudan kuwa Dhawrsada oo Bixiya Zakada, Rumeeyana Aayaadka Eebe. Taasina waxay ku Tusin Waasacnimada Naxariista Eebe iyo in lagu Dadaalo sidii loo Heli lahaa. Al-Acraaf (154-156).

157. ee ah kuwa Raaca Rasuulka Nabiga ah ee Ummiga ah ee ah kay ka helayeen Isagoo ku qoran agtooda Tawreed iyo Injiil, Farana wanaagga kana reeba Xumaanta una Banneeya Wanaagga (Xalaasha) kana Xarrima Xumaanta (Xaaraanta) kana dejiya Culayskii iyo Xadhkihii korkooda ahaa, kuwa Rumeeyey Nabigaas oo Qaddariyey oo u Gargaaray oo Raacay Nuurka lagu soo Dejiyey kuwaasu waa uun kuwa Liibaanay.

158. Waxaad Dhahdaa Dadow anugu

أَخَذَهُمُ الرَّجْفَةُ قَالَ رَبِّ لَوْ شِئْتَ أَهْلَكْتَهُم مِّن قَبْلِ وَإِنِّي أَنُفِّسُكُمَا بِمَا فَعَلَ السُّفَهَاءُ إِذْ أَنزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ وَأَنْتَ خَيْرُ الْمُنشِقِينَ ﴿١٥٦﴾

* وَكَتَبْنَا فِي هَذِهِ الْقُرْآنِ حَسَنَةً وَفِي الْآخِرَةِ إِنَّا هُنَا إِنَّا إِلَيْكَ قَالَ عِدَايَ أُصِيبُ بِهِ مَن أَنشَأَهُ وَرَحِمِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ فَسَأَكْتُبُهَا لِلَّذِينَ يَتَّقُونَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَالَّذِينَ هُمْ بِآيَاتِنَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٥٧﴾

الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ الرَّسُولَ النَّبِيَّ الْأُمِّيَّ الَّذِي يَجِدُونَهُ مَكْنُوبًا عِنْدَهُمْ فِي التَّوْرَةِ وَالْإِنْجِيلِ يَا أُولِي الْأَبْصَارِ يَا الْمَعْرُوفِ وَسَيُجَنَّبُ عَنْهُ الْمُنْكَرَ وَيُحِلُّ لَهُمُ الطَّيِّبَاتِ وَيُحَرِّمُ عَلَيْهِمُ الْجَبَّاتِ وَيَضَعُ عَنْهُمْ إِصْرَهُمْ وَالْأَغْلَالَ الَّتِي كَانَتْ عَلَيْهِمْ فَالَّذِينَ آمَنُوا بِهِ وَعَزَّرُوهُ وَنَصَرُوهُ وَاتَّبَعُوا النُّورَ الَّذِي أُنزِلَ مَعَهُ ۗ أُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿١٥٧﴾

قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكُمْ جَمِيعًا

waxaan ahay Rasuulkii Eebe ee Xaggiinna Dhammaan, waana Eebaha iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, Allaah mooyee macbuud kaloo xaq lugu caabudo ma jiro, isagaa wax nooleeya, waxna Dila ee Rumeeya Eebe iyo Rasuulkiisa Nabiga ah ee Ummiga ah ee Rumeeyey Eebe iyo Malaa'igtiisa Raacana, inaad hanuuntaan.

الَّذِي لَهُ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ يُحْيِي وَيُمِيتُ فَتَمَيِّزُ اللَّهُ بِنُورِهِ السُّبْحَىٰ
الَّذِي يَوْمُنَ بِاللَّهِ وَكَلامَتِهِ وَأَنبِئُوهُ
لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٥٨﴾

Aayadahani waxay Tilmaami Nabiga Muxameda (Naxariis iyo Nabagalyo Eebe korkiisa ha yeelee) oo ah inuu wanaagga faro Xumaantana ka reebo, Xalaashana u Banneyo Xaaraantana ka reebo, Dhibka iyo Culayskana ka fududeeyo, oy Naxariista Eebena Mudan Cidii raacda, oo Rumaysa, qaddarisa, U gargaarta, oo Raacda Quraanka Nuurka ah, inay Liibaanto, waana Rasuul Eebe u soo diray Dadkoo Dhan, oy Waajib tahay in la Raaco si loo hanuuno. waana taas Tilmaanta Nabiga, waxa Dadka laga dooni inay falaan oo Xaq ah Ciddaan Indho la'ayn. Al-Acraaf (157-158).

159. Waxaa ka mida Qoomkii Nabi Muuse Umad ku Hanuunsanayd Xaqa kuna Caddaalad falaysay.

وَمِن قَوْمِ مُوسَىٰ أُمَّةٌ يَهْدُونَ بِالْحَقِّ وَبِهِ
يَعْتَدُونَ ﴿١٥٩﴾

160. Waxaana u kala gaynay Laba iyo Toban Farac oo Ummadood, waxaana u Waxyoonaay Nabi Muuse markay Waraab warsadeen Qoomkiisii inuu ku garaaco Ushiisa Dhagaxa waxaana ka soo burqatay laba iyo toban ilood, cid kastana waxay ogaatay Meeshey ka Cabbi lahayd, waxaana ku hadhaynay Daruuro, waxaana ku soo Dejinay Manni (Macaan) iyo Cunno, waxaana ku nidhi ka Cuna wanaaggaan idinku Arzuqay, mana ayan na dulmiyin waxayse Dulmiyeen Naftooda.

وَقَطَعْنَاهُمْ أَقْتَىٰ عَشْرَةَ أَسْبَاطًا أُمَّةً
وَأَوْحَيْنَا إِلَىٰ مُوسَىٰ إِذِ اسْتَسْقَمَهُ قَوْمُهُ أَن
أَضْرِبْ بِعَصَاكَ الْحَجَرَ فَانْبَجَسَتْ مِنْهُ أَقْتَنَا
عَشْرَةَ عَيْنًا قَدْ عَلِمَ كُلُّ أُنَاسٍ مَّشْرِبَهُمْ
وَوَضَعْنَا عَلَىٰ عَيْنِهِمُ الْغَمَمَ وَأَنزَلْنَا عَلَيْهِمُ
الْمَنَّ وَالسَّلْوَٰنَ كُلُّوا مِنْ طَيِّبَاتِ
مَا رَزَقْنَاكُمْ وَمَا ظَلَمْنَا وَآلَكِن كَانُوا
أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿١٦٠﴾

161. Markii lagu yidhi dega Magaalada kana Cuna Meeshaad doontaan Dhehana Eebow noo Dambi dhaaf, kana gala Albaabka idinkoo Sujuudsan aan idiin Dhaafno Dambigiinnee, waannu u siyaadinaynaa samafalayaashee.

وَإِذ قِيلَ لَهُمُ اسْكُرُوا هَذِهِ الْقَرْيَةَ وَكُلُوا
مِنْهَا حَيْثُ شِئْتُمْ وَفُؤُولُوا حِطَّةً وَادْخُلُوا
الْبَابَ سَجْدًا تَلْفِيزًا كُمْ خَطِيبَتِكُمْ
سَرِيدَ الْمُحْسِنِينَ ﴿١٦١﴾

162. Waxayse ku badaleen kuwii dulmi falay oo ka mida hadal ka duwan kii

فَبَدَّلَ الَّذِينَ ظَلَمُوا مِنْهُمْ قَوْلًا غَيْرَ الَّذِي

loo yidhi (Fala), waxaana ku Dirray Cadaab Samada kaga Yimid dulmigoodii Dartiis.

قِيلَ لَهُمْ فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِجْزًا مِنَ السَّمَاءِ
بِمَا كَانُوا يَظْلِمُونَ ﴿١٦٣﴾

Eebehen wuxuu inoo Sheegay inay qoomkii Nabi Muuse ka mid ahaayeen Dadka Xaqa raacay oo ku socday, kana yeelay Banii Israa'iil qaybo Midba meel ka cabto, Eebana ugu Nicmeeyey Nicmooyin Badan sidaan soo sheegnay horay ayse Dulmi faleem wanaaggiina Xumaan ku badaleen, Taasina waa Caadadooda Xun ee Xaqa ka leexsan. waxaase lagu abaal mariyey Ciqaab daran, ay Waajib tahay in laga Digtoonaado isagoo kale. Al-Acraaf (159-162).

163. Warso (Yuhuud) Magaaladii Badda ku Dhawayd (Dadkeedii) markay Xadgudbayeen Sabtida, oo Kalluunkoodu u Imanayey Maalinta Sabtida ah isagoo Muuqda, Maalintaan Sabti ahayna uma Timaaddo, saasaana ugu Imtixaanna Faasiqnimadooda Darteed.

وَسَأَلْتَهُمْ عَنِ الْقَرْيَةِ الَّتِي كَانَتْ حَاضِرَةً
الْبَحْرِ إِذْ يَعْبُدُونَ فِي السَّبْتِ إِذْ تَأْتِيهِمْ
حَيَاتُهُمْ يَوْمَ سَبْتِهِمْ شُرَّعًا وَيَوْمَ لَا يَسْبِتُونَ
لَا تَأْتِيهِمْ كَذَلِكَ بَلَّوْهُم بِمَا كَانُوا
يَفْسُقُونَ ﴿١٦٣﴾

164. Ka Warran markay Tidhi Umad ka mida maxaad u Wacdiyeysaan qoom Eebe halaagi ama u Cadaabi si daran, waxayna dhaheen waa Eebe u Cudur daarasho, iyo inay Dhawrsadaan inay u Dhawyihiin.

وَإِذْ قَالَتْ أُمَّةٌ مِنْهُمْ لِمَن تَعْبُدُونَ قَوْمًا اللَّهُ مُهْلِكُهُمْ
أَوْ عَزِيزُهُمْ عِدَابًا سَدِيدًا قَالُوا مَعذِرَةٌ لِّإِلٰهِ رَبِّكُمْ
وَلَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿١٦٤﴾

165. Markay Halmaameen wixii lagu waaniyey waxaan korinnay kuwii Xumaanta Reebayey, waxaana ku qabanay kuwii Dulmiga falay Cadaab Xun, Faasiqnimadooda Darteed.

فَلَمَّا سَأَلُوا مَا ذُكِّرُوا بِهِ أَجَبْنَا الَّذِينَ يَبْهَتُونَ
عَنِ السُّوءِ وَأَخَذْنَا الَّذِينَ ظَلَمُوا بِعَذَابٍ بَئِيسٍ بِمَا
كَانُوا يَفْسُقُونَ ﴿١٦٥﴾

166. Markay ku Madax adaygeen wixii laga reebay yaan ku nidhi Noqda Daanyeer Dullaysan.

فَلَمَّا عَتَوْا عَنْ مَنَاهُوعَتُهُ قُلْنَا لَهُمْ كُونُوا قِرَدَةً
خَاسِيَةً ﴿١٦٦﴾

Wuxuu Eebe halkan kaga warramay Yuhuuddii degganayd magaalo Badda ku Dhawayd oo lagu sheegay Magaceeda Aayla, Markii Dadkeedii Xadgudbeen oo Kalluunka laga reebay Maalinta Sabtida ah ay Ugaadsadeen Markuu u soo Muuqdo Sabtida, Maalmaha kalana ka qarsoomo Imtixaan dartiis, waxayna u qaybsameen Saddex qeybood: Koox Ugaadhsatay, mid ka Reebtay Xumaanta, iyo mid iska Aamustay, Kuna yidhi Kooxdii wax Reebaysay maxaad u Waaninaysaan Dad Eebe Halaagi ama Cadaabi, markaas ugu Jawaabeen inaan Waajib gudanno yaannu u Fali, ama ay Dhawrsadaan, markiise ay halmaameen waanadii yaa waxaa la koriyey kuwii Xumaanta Reebayey, waxaana Cadaab lagu qabtay kuwii Xumaanta falay, Laguna yidhi Daanyeer Dullaysan noqda, Taasi waxay ku tusin Waajibnimada Xumaan Reebka iyo Samo farka, waxaana la sheegay in Yuhuuddu Dabi jireen Kalluunka Maalinta Sabtida ah, markuu ku dhacana ay la baxaan Maalinta Dambe, taasina waxay ku tusin Khayaamada iyo Xumaanta Yuhuud.

Tan kale waxaa laga aamusay kuwii aamusay, waxaana lays warsaday in la halaagay iyo in la Nabadgaliyey, Labadana waa la Sheegay. Al-Acraaf (163-166).

167. Xusuusta markuu Eebe Ogeysiiyey inuu u soo Bixinayo Yuhuud tan iyo Qiyaamaha cid Dhadhansiisa Cadaab Xun, Eebahaana Ciqaabtiisu way Deg degtaa, waana Dambi Dhaafe Naxariista.

وَأَذِّنْ تَادَانَ رَبُّكَ لِيَسْبَعَنَّ عَلَيْهِمْ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ مَنْ
يَسُومُهُمْ سُوءَ الْعَذَابِ إِنَّ رَبَّكَ لَسَرِيعُ الْعِقَابِ
وَإِنَّهُ لَغَوْرٌ رَجِيمٌ ﴿١٦٧﴾

168. Waxaanna ku kala gaynay Dhulka iyagoo Ummada ah, kuwo suubban iyo kuwo kalaba, waxaanna ku imtixaannay wanaag iyo Dhibba inay Noqdaan.

وَقَطَعْنَا فِي الْأَرْضِ أُمَّمًا مِنْهُمْ الصَّالِحُونَ
وَمِنْهُمْ دُونَ ذَلِكَ وَتَوَاتَرْتُهُم بِالْحَسَنَاتِ
وَالسَّيِّئَاتِ أَعْلَاهُمْ يَرْجَعُونَ ﴿١٦٨﴾

169. Waxaanna Baddelay kuwo Xun oo Dhaxlay Kitaabkii qaadana Muuqa Adduunyadan Dhaw, iyagoo Dhihi waa naloo dhaafi hadduu u Yimaaddo muuqaal la midana way qaataan, miyaan laga qaadin Ballankii Kitaabka inayan Eebe waxaan xaq ahayn ku sheegin oyna Akhriyin waxa Dhaxdiisa ah, Daarta Aakhiro yaana u Khayr roon kuwa dhawrsada ee miyeeydan wax kasayn.

فَخَلَفَ مِنْ بَدْرِهِمْ خَلْفٌ وَرَوُوا الْكِتَابَ
يَأْخُذُونَ عَرَضَ هَذَا الْأَدْنَى وَيَقُولُونَ
سَيُعَذِّبُنَا وَإِنَّا يَا تَهْمَ عَرَضَ سُنْهُ يَأْخُذُونَ
أَلَمْ يُؤْخَذْ عَلَيْهِمْ بِبِئْتِنِ الْكِتَابِ أَن لَّا يَقُولُوا عَلَى
اللَّهِ إِلَّا الْحَقَّ وَدَرَسُوا مَا فِيهِ وَالذَّارُ الْآخِرَةُ خَيْرٌ
لِّالَّذِينَ يَتَّقُونَ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿١٦٩﴾

170. Kuwa Qabsada Kitaabka oo Ooga Salaadda annagu ma dayacno ajriga kuwa wax Suubbiya (Samo fala).

وَالَّذِينَ يُمَسِّكُونَ بِالْكِتَابِ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ إِنَّا
لَأَنْضِيعَ أَجْرَ الْمُصْلِحِينَ ﴿١٧٠﴾

Wuxuu Eebe u yaboohay Yuhuud in loo soo Bixiyo Tan iyo qiyaamada Dad Dhadhansiya Ciqaab daran, Eebana isagaa wax Ciqaba, Naxariistana, waxaana lagu kala saydhay Adduunka iyagoo kuwo Roon iyo kuwo Xunba lahaa, waana la Imtixaamay Bal inay waantoobaan, waxaase ka dambeeyey kuwaas kuwo Adduunyada ka doortay Aakhiro, inkastoo Ballan laga qaaday waxaan Run iyo xaq ahayn inayna Eebe ku sheegin, oy Kitaabkana Bartaan, Illeen daarta Aakhiro Yaa u Khayroon Ciddii Dhawrsan oo wax kasiye, Ciddiise Qabsata Kitaabka Xaqa ah iyo Xaqa dhabta ah oo Salaadda Oogta Eebe ma Dayaco Ajriga Sama falaha. waxayna ku tusin Wanaag ku Dadaalka. Al-Acraaf (167-170).

171. (Ka warran) markaan ku koryeel-lay Buurtii, sidii isagoo hadhayn, una maleeyeen inuu ku Dhici, kuna nidhi ku qaata waxaan idin siinnay Niyad Adag, kuna waana qaata waxa ku sugan si aad u dhawrsataan.

﴿وَأَذِّنْ تَقْنَا الْجَبَلِ فَوْقَهُمْ كَأَنَّهُ ظُلَّةٌ وَظَنُّوا أَنَّهُ
وَافِعٌ بِهِمْ خُذُوا مَا آتَيْنَاكُمْ بِقُوَّةٍ وَاذْكُرُوا مَا فِيهِ
لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٧١﴾﴾

172. (Xusuuso) markuu Eebahaa ka qabtay Dadka Dhabarkooda Faracoodii uuna marag uga yeelay Naftooda, kuna Yidhi Miyaanaan Eebihiin ahayn, oy dhaheenna inaad Eebahanno tahay yaan Marag Kacnay, inaydaan dhihin Maalinta Qiyaame annagu Waan halmaansanayn kan.

وَإِذْ أَخَذْنَا مِنْ بُنَىٰ آدَمَ مِنْ ظُهُورِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ
وَأَسْهَدَهُمْ عَلَيْهَا فَمِنْهُمْ مَنْ قَبَّلَ لِقَاءَ آدَمَ
سَهْدًا أَن تَقُولَ أَوْفَىٰ الْقَيْمَةِ إِنَّا كُنَّا عَنْ هَذَا
عَافِينَ ﴿٧٢﴾

173. Ama aydaan Dhihin waxaa wax la wadaajiyey (Eebe) Aabbayaalkannagii mar hore, annaguna waxaan nahay farac ka Dambeeyey, ee miyaad noo halaagi waxay faleen Xumo falayaal.

أَوْ تَقُولُوا إِنَّمَا أَشْرَكَ آبَاؤُنَا مِنْ قَبْلُ وَكُنَّا ذُرِّيَّةً
مِنْ بَعْدِهِمْ أَفَتُهْلِكُنَا بِمَا فَعَلَ الْمُبْطِلُونَ ﴿٧٣﴾

174. Saasaannu u Caddaynaa Aayaadka iyo inay u Noqdaan Xaqa.

وَكَذَلِكَ نَقُصُّ عَلَيْكَ الْآيَاتِ وَلَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٧٤﴾

Eebe wuxuu ku Amray Bani Israa'iil inay Niyad adag ku qaataan Kitaabkii Tawreed, wuxuuna korkooda yeelay Buur hadhaysay, haddayna Aqbalinna lagu dabooli, Waxaa Kale oo la faray inay ku Socdaan Tawreed si ay u Dhawrsadaan, Aayadaha kalana waxay ka warrami in Eebe Bani Aadamka Naftooda Marag uga yeelay, warsadaya inuu Eebahood yahay iyo in kale, oyna marag kacceen Ilaahnimada Eebe, si ayna u Dhihin Maalinta qiyaame waxaan halmaansanayn oo Jaahil ka ahayn Arrintan, ama ayan u Dhihin waxaa Eebe la wadaajiyey Aabbayaalkanno, aanaguse waxaan nahay Farac Dambeeyey ee ma waxaa naloo halaagi waxay Dad Xun faleen, Saasuuna Eebe ugu Caddeeyey Aayaadka inay Xaqa u Noqdaan.

Taasina waxay Muujin inaan Dadka Cudur Daar u hadhin iyo waxay ku Calaacalaan. Waxaana la wariyey in Eebe kulmiyey Arwaaxda Dadka Ballanna ka qaaday inay Rumeeyaan Xaqa, Eebana u Hoggaansamaan.

waxaana habboon Eebe ka yaabid, Toosnaan iyo Wanaag Jacayl. Al-Acraaf (171-174).

175. Ku Akhri korkooda kii warkiisii aan Siinnay Aayaadkannaga oo ka Siibtay, Shaydaanna uu Raacay (Isaga), kana mid Noqday kuwa Baadida ah.

وَأَنكَلْ عَلَيْهِمْ نَبَأَ الَّذِينَ ءَاتَيْنَاهُ ءَايَاتِنَا فَانْسَلَخَ مِنْهَا
فَأْتِيَعَهُ الشَّيْطَانُ فَكَانَ مِنَ الْغَاوِينَ ﴿٧٥﴾

176. Haddaan Doonno waannu koryee-li lahayn, hasayeeshee wuxuu u iishay Dhulka (Adduunyo Jacayl) wuxuuna Raacay Hawadiisa, wuxuuna la mid yahay Eey haddaad Erido wuu lalmin Carrabka, haddaad Deysana wuu lalmin, saasna waa Masalka Qoomka Beeniyey Aayaadkannaga ee uga war-ran Qisooyin inay Waantoomaan.

وَلَوْ شِئْنَا لَرَفَعْنَاهُ بِهَا وَلَكِنَّهُ أَخْلَدَ إِلَى الْأَرْضِ
وَاتَّبَعَهَا هُوَ وَمَنْ يَتَّبِعْهَا فَهُوَ سَاهٍ مِثْلَ الْقَوْمِ
الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا فَاقْصُصِ الْقَصَصَ لَعَلَّهُمْ
يَتَفَكَّرُونَ ﴿٧٦﴾

177. Waxaa Tusaale u Xun Qoomkii

سَاءَ مَثَلًا الْقَوْمِ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَأَنْفُسُهُمْ

Beeniyey Aayaadkannaga, Naftoodana
waxay ahaayeen kuwo Dulmiya.

﴿أَوْ يَطَّيَّرُونَ﴾

178. Ciddii Eebe hanuuniyo umbaa
hanuuni, Cidduu Dhumiyana waa uun
kuwa Khasaaray.

﴿مَنْ يَهْدِ اللَّهُ فَهُوَ الْمُهْتَدَىٰ وَمَنْ يُضِلَّهُ فَاُولَٰئِكَ هُمُ الْخَاسِرُونَ﴾

﴿١٧٨﴾

Say dooni ha ahaatee waxay ka Warrami Aayadahani Cid Cilmi la baray oo adduunyo ka doortay, xaqana ka Leexday, noqdayna Baadi, oyna ku habboonayd inuu ku hanuuno, wuxuuse Jeclaaday Adduunyada, wuxuuna Raacay Hawadiisa Xun, wuxuuna la mid Yahay Eey had iyo Jeer Carrabka lalmin, waana sidaas Ciddii Beenisa Xaqa iyo Aayaadka Eebe, ayna habbontahay in Dadka looga warramo inay waantoomaan, Tusaale iyo Dadna iyagaa u xun, Illeen waxay Beeniyeen Aayaadka Eebe, waxayna Dulmiyeen Naftooda, Cidii Eebe hanuuniyo yaa hanuuni, Tuu Dhumiyana wuu Dhumi, taasina waxay ku tusin Xumaanta Cid Eebe Cilmi baray oon ku Socon, Xaqana raacin, Adduunyana u Xishay, Cidday Dooni ha noqotee, ama Banii Israa'iil ama Carabtii ama Cid kasta, Eebana wuxuu uun, Dadka ka Dooni Wanaag, Xaq raac, iyo Toosnaan Dhab ah. Al-Acraaf (175-178).

179. Waxaan u Abuurray Jahannamo
wax badan oo Jinni iyo Insiba leh,
waxayna Leeyihiin Quluub ayna wax ku
Kasayn, waxayna Leeyihiin Indho ayna
wax ku Arkayn, waxayna Leeyihiin
Dhago ayna wax ku Maqlayn, Kuwasina
waa Xoolo oo Kale, waana ka sii
Dhunsanyihiin, kuwaasina waa uun kuwa
Halmaansan.

﴿وَلَقَدْ دَرَأْنَا الْجَهَنَّمَ كُرْسِيًّا مِّنَ الْجِنِّ وَالْإِنسِ لَهُمْ قُلُوبٌ

لَا يَفْقَهُونَ بِهَا وَالْهَمَّ أَعْيُنٌ لَا يُبْصِرُونَ بِهَا وَالْهَمَّ

ءَأْدَانٌ لَا يَسْمَعُونَ بِهَا أُولَٰئِكَ كَالْأَنْعَمِ بَلْ هُمْ

أَصْلٌ أُولَٰئِكَ هُمُ الْغَافِلُونَ﴾

180. Eebe waxaa u Sugnaaday Magacyo
Wanaag badan, ee ku Barya, Iskagana
taga kuwa leexin Magacyadiisa, wa-
xaannu ka abaal marin waxay Camal
falayeen.

﴿وَلِلَّهِ الْأَسْمَاءُ الْحُسْنَىٰ فَادْعُوهُ بِهَا وَذُرُوا الدِّينَ يُحْدِثُونَ

فِي أَسْمَائِهِ سُبُحْرُونَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ﴾

181. Waxaa ka mida waxaan Abuurray
Ummad ku Hanuunsan Xaqa, Kuna
socon.

﴿وَمَنْ حَقَّ عَلَيْهِ الْهُدَىٰ فَإِنَّ الْهُدَىٰ وَسِيْرَهُ لَشَدِيدٌ﴾

Eebe isagaa Abuurray Jahannamo (Eebaan ka magan galnaye), wuxuuna u Ballanqaaday inuu Jinni iyo Insi ka Buuxiyaa, Maxaayeelay wax ma kasayaan, Xubnaha Eebe siiyey ee ah: Qalbiga, Indho iyo Dhago toona kuma Intifaacayaan, waana Xoolo oo kale iyo ka sii daran, waana kuwo halmaamay Xaqa, Tan kale Ilaaheenna wayn wuxuu leeyahay Magacyo Wanaag badan oyna habboontahay in lagu baryo, lagana fogaado kuwa Leexin Magaca Eebe oo ka yeeli wuxuusan Raalli ka ahayn, oo ah Beenin, Leexin, si Xun u fasirid iyo wax kastoo wax u Dhimi, waana la abaal marin kuwaas.

waxaase jirtay Dad hanuunsan oo Xaqa ku socda, Siduu Rasuulku Yidhi (Naxariis iyo Nabadgalayo Eebe korkiisa ha yeelee): Lama waayo Koox Ummaddayda ah oo Xaqa ku Taagan oo muuqda wax dhibi karana usan jirin inta Qiyaamadu ka Timaaddo. Waxaa wariyey Bukhaari. Al-Acraaf (179-181).

182. Kuwa Beeniyey Aayaadkannaga waxaannu ka qaban meel ayna Ogayn. وَالَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا سَأَسْتَدْرِكُهُمْ مِنْ حَيْثُ لَا يَأْتَمُونُ ﴿١٨٢﴾
183. Waana u Sugi, Makrigaygu aad buu u daran yahay. وَأْمَلِي لَهُمْ إِنْ كِيدِي مَتِينٌ ﴿١٨٣﴾
184. Miyeyna Fikirin inaan Saaxiibkooda (Nabiga) Waalli hayn, waxaan dige Cad ahaynna uuna ahayn. أَوْ لَوْ يَتَفَكَّرُونَ مَا يَصِاحِبُهُمْ مِنْ جِنَّةٍ إِنْ هُوَ إِلَّا نَذِيرٌ مُبِينٌ ﴿١٨٤﴾
185. Miyeyna Dayin Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, iyo waxa Eebe abuuray oo wax ah, iyo inay Mudantahay inay Dhawdahay Ajashoodu, Hadalkayse Quraanka ka dib Rumayn. أَوْ لَوْ يَنْظُرُونَ فِي مَلَكُوتِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا خَلَقَ اللَّهُ مِنْ شَيْءٍ وَأَنْ عَسَى أَنْ يَكُونَ قَدْرًا قَرِيبٌ أَجْمَعُهُمْ قِيَامِي حَدِيثٍ بَعْدَهُ يُؤْمِنُونَ ﴿١٨٥﴾
186. Cidduu Dhumiyo Eebe wax Hanuunin ma leh. wuxuuna kaga tegi Xad gudubkooda iyagoo ku Wareersan. مَنْ يُضِلِلِ اللَّهُ فَلَا هَادِيَ لَهُ. وَيَذَرُهُمْ فِي طُغْيَانِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿١٨٦﴾
187. Waxay ku Warsan Saacadda (Qiyaame) markay Sugnaan, waxaad Dhahdaa Ogaanshaheedu waa Eebahay Agtiisa, waqtigeeda wax Muujin kara oon Eebe ahayn ma jiro, waxay ku Cuslaatay Samooyinka iyo Dhulka, waxaan kado ahaynna idiinkuma Timaddo, waxay ku warsan Saacadda sidii adoo og, waxaad dhahdaa Ogaanshaheedu waa uun Eebe Agtiisa Dadka Badankiisuse ma oga (Xaalkaas). يَسْتَعْلُونَكَ عَنِ السَّاعَةِ أَيَّانَ مُرْسِمُهَا قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِنْدَ رَبِّي لَا يُجَلِّيهَا لِوَقْتِهَا إِلَّا هُوَ تَقُلَّتْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ لَا تَأْتِيكُمُ الْآبَعْتَةُ يَشْعُرُونَكَ كَأَنَّكَ حَاقِقٌ بِعَتَمًا قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِنْدَ اللَّهِ وَلَٰكِنْ أَكْثَرُ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨٧﴾

Xaq beeniye Eebaa siduu doono u Ciqaabi, in Xolo iyo Nolol lagu Imtixaamana waa Dhici kartaa, Eebana wuu sugi markuuse qabto Ciqaabtiisu way Darantahay, waana inay gaaladu Fikirto inaan Nabigu Waallayn, ee dige Cad uun yahay, hase eegeen Mulkiiga iyo Xukunka Eebe Samooyinka iyo Dhulka, waxa Eebe abuuray, waxaana laga yaabaa inay Ajashoodu dhawdahay, maxayse rumayn Quraanka ka dib. Cidduu Eebe Dhumiyo wax hanuunin ma leh, waxayna ku wareeri Xumaanta. Saacadda Qiyaamana Cidaan Eebe ahayn ma oga wayna ku Cuslaatay Cirka iyo Dhulka, waxayna ku imaan kado, hase la rumeeyo, oo loo darbado. Xadiithna waxaa ku sugnaaday in qiyaamadu Dhici iyadoo Dad wax kala gadan, ama cidii Maali Xoolaheeda, ama Dhoobi Darkeeda oo Malaasi, ama Cunnadii kor u qaaday (Eebe ha naga Fududeeyo Dhibkeeda isagaa Awood leh). Al-Acraaf (182-187).

188. Waxaad Dhahdaa uma hanto Naftayda Nacfi iyo Dhib midna, wuxuu Eebe doono mooyee, haddaan ahay mid og waxa maqan waxaan badsan lahaa قُلْ لَا أَمْلِكُ لِنَفْسِي نَفْعًا وَلَا ضَرًّا إِلَّا مَا شَاءَ اللَّهُ وَلَوْ كُنْتُ أَعْلَمُ الْغَيْبِ لَا سَأَلْتُكَ مِنْ الْخَيْرِ

Khayrka imana taabteen Xumaani, anigu waxaan uun ahay u dige una Bishaareeye Qoomkii Rumayn (Xaqa).

189. Eebe waa kan idinka abuuray Naf kaliya, kana yeelay Xaggeeda Haweenaydiisii inuu Weheshado markay Kulmeenna waxay qaadday uur Fudud, Saasayna ahayd, Markay Cuslaatayna waxay Baryeen Eebahood: haddaad Na siiso (Ilmo) Suubban waxaan noqonaynaa kuwa Shugriya.

190. Markuu siiyey mid Suubban waxay u Yeeleen wax la wadaaga wuxuu Eebe siiyey, Eebaa ka sarreeya waxay la Wadaajiyeen.

Awoodda Eebaa iska leh, cid Nacfi iyo Dhib hananna ma jirto, Illeen Eebaa Faray Nabigiisa (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe kokiisa ha yeelee) inuu dadka u Caddeeyo Xaalkaas, hadduu Ogyahay waxa Maqanna wuxuu badsan lahaa Khayrka Dhibna uusan taabteen, waana uun u Dige U bishaareeye, Ciddii Xaqa Rumayn. Eebana Dadka wuxuu ka Abuuray Naf kaliya Aadam kana ahaysiiyey Haweenaydiisii si ay isugu xasilaan isuna Weheshadaan, markay kulmeenna ay Uuraysatay ayna Eebe warsadeen inuu Ilmo Suuban Siiyo, markaasay Dadku Eebe wax la wadaajiyaan Arrimihiisa, intay ku mahdin lahaayeen, Eebana waa ka sarreeyaa wax lala Wadaajiyey.

Waxaana la sheegay in kuwo Eebe wax la wadaajiyey ay ahaayeen Dad kale oon ahayn Aadam iyo Xaawo. Al-Acraaf (188-190).

191. Ma waxay la wadaajin waxaan wax Abuurin, iyagana la Abuuro.

192. Oon Karaynna gargaar, naftooda aan u gargaarayn.

193. Haddaad ugu Yeedho Hanuunkana idima raacaan, waana isku mid haddaad u Yeedhaan iyo haddaad ka Aamustaanba.

194. Kuwaad caabudaysaan (U yeedheysaan) Eebe ka Sokow waa Addoommo idinkoo kala ah, bal u Yeedha oo haydin Yeeleen (Aqbaleen) haddaad Run sheegaysaan.

195. Ma waxay Leeyihiin lugo ay ku Socdaan, mise waxay Leeyihiin gacmo ay wax ku qabtaan, mise waxay leeyihiin indho ay wax ku arkaan, mise waxay leeyihiin

وَمَا مَسَّيَ السُّوءُ إِنَّا إِنَّا لِلْآئِدِيرِ وَبِشِيرِ لِقَوْمِ نُؤْمِنُونَ ﴿١٨٨﴾

*هُوَ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ وَجَعَلَ مِنْهَا زَوْجَهَا لِيَسْكُنَ إِلَيْهَا فَلَمَّا تَغَشَّاهَا حَمَلَتْ حَمْلًا خَفِيًّا فَمَرَّتْ بِهِ فَلَمَّا أَفْقَلَتْ دَعَوَا اللَّهَ رَبَّهُمَا لَئِنْ آتَيْتَنَا صَالِحًا لَتُكُونَنَّ مِنَ الشَّاكِرِينَ ﴿١٨٩﴾

فَلَمَّا آتَتْهُمَا صَالِحًا جَعَلَهُ شُرَكَاءَ فِيمَا آتَاهُمَا فَتَعَلَّى اللَّهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿١٩٠﴾

أَيُّدِرُونَ مَا لَا يَخْلُقُ سَيِّئًا وَهُمْ يُخْلِقُونَ ﴿١٩١﴾

وَلَا يَسْتَطِيعُونَ لَهُمْ نَصْرًا وَلَا أَنفُسُهُمْ يَنْصُرُونَ ﴿١٩٢﴾

وَإِن تَدْعُوهُمْ إِلَى الْهُدَى لَا يَتَّبِعُوا سِوَاهُ عَلَيْكُمْ أَذْعُونَهُمْ أَمْ أَنْتُمْ صَلِيمُونَ ﴿١٩٣﴾

إِنَّ الَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ عِبَادٌ آمَنَّا لَكُمْ فَادْعُوهُمْ فَلْيَسْتَجِيبُوا لَكُمْ إِن كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿١٩٤﴾

أَلَهُمْ أَرْجُلٌ يَمْشُونَ بِهَا أَمْ لَهُمْ آيْدٍ يَبِطُشُونَ بِهَا أَمْ لَهُمْ أَعْيُنٌ يَبْصُرُونَ بِهَا أَمْ لَهُمْ آذَانٌ

Dhago ay wax ku Maqlaan, waxaad Dhahdaa u Yeedha Shurakadiinna in a Dhagra hana i sugina.

يَسْمَعُونَ يَهَاقِلُ أَذْعُو سُورَكَاءَ كُرْتَمَ
كَيْدُونَ فَلَا تَنْظُرُونَ ﴿١٩٥﴾

196. Waligaygu waa Ilaaha soo Dejiyey Kitaabka isagaana u Gargaara kuwa Suubban.

إِنَّ رَدِّقَى اللَّهِ الَّذِي نَزَّلَ الْكِتَابَ وَهُوَ تَوَلَّى
الصَّالِحِينَ ﴿١٩٦﴾

Siday Eebe ula Caabudi waxaan wax Abuurayn oo la Abuuri iyaga, karayna inay u Gargaaraan ama Naftooda u Gargaarayn, haddaad wax toosin ugu Yeedhana kuma raacaan, waana isku mid haddaad u yeedhaan ama ka Aamustaan, waana Addoomo idinkoo kale ah, mana ajiibaan hadday u Yeedhaan, Lugo ma leeyihiin ay ku Socdaan, ama Gacmo ay wax ku Qabtaan, ama Indho ay wax ku Arkaan, ama Dhago ay wax ku Maqlaan, ha soo Kulmiyaan Shurakadooda hana Dhagreen waxna yeyna sugin, Gargaaraha Nabiga ee kuwa Suubban Dhaqaaleeya waa Eebaha soo Dejiyey Kiaabka Quraanka ah, mana habboona, mana Bannaana in la Caabudo waxaan Eebe ahayn, waxna laga rajeyo, Illeen Eebe umbaa Awoodd Buuxda lehe. Al-Acraaf (191-196).

197. Waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow ma karaan Gargaarkiinna, Naf-toodana uma Gargaarayaan.

وَالَّذِينَ نَادَعُونَ مِنْ دُونِهِ لَا يَسْتَجِيبُونَ
تَضَرُّعَكُمْ وَلَا أَنْفُسَهُمْ يَتَضَرَّوْنَ ﴿١٩٧﴾

198. Hadday ugu Yeedhaan Hanuunkana ma Maqlaan waxaadna aragtaa iyagoo ku soo Eegi oon waxba Arkayn.

وَإِنْ تَدْعُهُمْ إِلَى الْهَدَىٰ لَا يَسْمَعُوا وَتَرْتَهُمْ يَنْظُرُونَ
إِلَيْكَ وَهُمْ لَا يُبْصِرُونَ ﴿١٩٨﴾

199. Qaado waxa Fudud (ee akhlaaqda dadka ah) Farna Wanaagga kana Jeed-so Jaahiliinta.

خُذِ الْعَفْوَ وَأْمُرْ بِالْعُرْفِ وَأَعْرِضْ
عَنِ الْجَاهِلِينَ ﴿١٩٩﴾

200. Hadduu ku Waswaasiyo Shaydaan waswaasiye ka Magangal Eebe isagaa Maqle oge ahe.

وَمَا يَنْزَعُكَ مِنَ الشَّيْطَانِ تَرْغٌ فَاسْتَعِذْ بِاللَّهِ
إِنَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٠٠﴾

201. Kuwa Dhawrsaday hadduu Taabto Shar Shaydaan way Xusuustaan (Waantoomaan) wayna Arkaan Xaqa (Toosnaadaan).

إِنَّ الَّذِينَ اتَّقَوْا إِذَا مَسَّهُمْ طَائِفٌ مِنَ الشَّيْطَانِ
تَذَكَّرُوا فَإِذَا هُمْ مُبْصِرُونَ ﴿٢٠١﴾

202. Walaalaha Shaydaankuse waxay ku Kaalmeeyaan Baadida kamana Daa-laan.

وَإِخْوَانُهُمْ يَمُدُّونَهُمْ فِي الْغَيِّ ثُمَّ
لَا يُبْصِرُونَ ﴿٢٠٢﴾

Waxa Eebe ka soo hadhay oo la Caabudo waa waxaan waxba karayn, Gargaari karinna, Naftoodana u Gargaari karin, kumana maqlaan, kumana Arkaan. Wuxuuna Eebe Fari Dabecada wanaagga iyo Wanaagga oo la faro, Jaahiliintana laga Jeedsado, hadduu Shaydaan Waswaasiyo Ruuxana waa inuu Eebe ka magan galaa Illeen Eebaa waxna maqla waxna Oge. Maxaa yeelay waxaa ka mida Xaalka kuwa Dhawrsada in marka Shaydaan Xumaan ku Taabto ay Xusuustaan Eebe Waantoomaana, Kuwa Gaaloobayse waxaa sii Dhumiya Shaydaan Illeen Walaalay ka yeeshene. Aayadahanna waxay fari Dadka Wanaag, Ugana Digi Xumaanta, lagana Digoonaado Shaydaanka, Gaalada, Jaahiliinta.

Waxaana Xadiith ah: Xidhiidhi Ciddii ku goysa, Siina Ciddii kuu Diida, kana Jeedso Ciddii ku Dulmida. Saas darteed waa in Eebe uun la Caabudo, Wanaagna laga rajeeyo, Shaydaan iyo Colkiisna laga Digtoonaado. Al-Acraaf (197-202).

203. Haddaadan ula Imaannin Aayad waxay Dhahaan: Maxaad u soo dooran wayday, waxaad dhahdaa waxaan uun Raaci wixii layga waxyooday Xagga Eebahay, Kaasina waa Xujooyin Xagga Eebihiin ka ahaatay iyo Hanuunka iyo Naxariista Ciddii Rumayn (Xaqa).

وَإِذَا تَوَلَّوْا مِنْهُمْ يَبْتَغِيهِمْ فَيَأْخُذُهُمْ قُلُوبُهُمْ لَمْ يُؤْمَرُوا بِأَلَّا تُؤْمَرُوا سَبَّحْتُمْ لَكُمْ رَحْمَةٌ ۖ وَرَبُّكُمْ فَاعْبُدْهُ ۚ وَذَكَرْ رِزْقَكَ ۚ إِنَّ فِي قَلْبِكَ خِصْفًا ۚ وَلَدُونَ الْجَهْرِ مِنَ الْقَوْلِ بِالْغُدُوِّ وَالْآصَالِ وَلَا تَكُنْ مِنَ الْغَافِلِينَ ﴿٤٥﴾

204. Markii la Akhriyo Quraanka Dhagaysta una Dhag raariciya, in laydiin Naxariisto.

وَإِذَا فُرِئَ الْقُرْآنُ فَاسْتَمِعُوا لَهُ وَأَنْصِتُوا لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٤٦﴾

205. ku Xus Eebahaa Naftaada Khus-huuc (Baryo) iyo Cabsi, iyo Qaylo la'aan hadal, Aroor iyo Galabba, hana Noqon kuwa Halmaama (Xuska Eebe).

وَإِذَا فُرِئَ الْقُرْآنُ فَاسْتَمِعُوا لَهُ وَأَنْصِتُوا لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٤٦﴾

206. Kuwa Eebe agtiisa ah iskama Kibriyaan Cibaadadiisa wayna u Tasbiixsadaan (Nasahaan), Isagayna u Sujuudaan.

إِنَّ الَّذِينَ عِنْدَ رَبِّكَ لَا يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِهِ وَيَسْتَجِيبُونَ لَوْلَهُ يُسْجَدُونَ ﴿٤٧﴾

Gaaladu waxay warsadeen Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Inuu la yimaaddo Mucjisooyin Jeebkiisa ah, wuxuuse Raacaa wixii Eebe u waxyooday oo xaq ah, waxna lagu kala garto, Hanuun iyo Naxariisna u ah Ciddii Xaqa Rumayn, Xaquuna waa u Cad yahay Ciddii raaci, oo markuu maqlo Quraankoo la Akhrin dhagaysta una Dhagraariciya, si loogu naxariisto. Waana in Eebe si Hoos iyo Khusuuca loo Xuso oon qaylo lahayn, waqti kasta iyo Subax iyo Galabba, lana halmaamin. Malaa'igta Eebe Ag joogtana Iskama wayneyyaan Cibaadadiisa, wayna nasahaan oo u Tasbiixsadaan wayna u Sujuudaan.

Saas darteed waa in Xaqa la Raaco, Quraankana la Akhriyo, Eebe loo Xuso Hoos Subax iyo Galabba, lana halmaamin, Illeen Malaa'igtaa Caabudi, isna Kibrinayn, una sujuudiye. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dadow u Dhimriya Naftiinna Illeen uma yeedhaysaan mid Dhaga la'ama Maqane, Ilaahaad u yeedhaysaan waa Wax Maqle, Dhawe, idiinkana Dhaw Cunaha Gaadiidkiinna.

Waxayna ahayd mar Dadku kor u Qaadeen Ducada. Al-Acraaf (203-206).

Surat Al-Anfaal

سُورَةُ الْأَنْفَالِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

1. Waxay ku warsan Dadku (Xukunka) Qaniimada, waxaad dhahdaa Qaniimada waxaa iska leh Eebe iyo Rasuulka ee ka Dhawrsada Eebe, Wanaajiyana Xaalka Dhexdiinna ah, Eebana Adeeca iyo Rasuulkiisa haddaad kuwo Ru-meeyey tihiiin.

2. Mu'miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Eebe la Xuso ay Cabsato Quluubtoodu, marka lagu Akhriyo kordooda Aayaadka Eebana ay Iimaan u kordhiso, Eebahood uunna tala saarta.

3. Ee ah kuwa ooga Salaadda, waxaanu ku Arzaaqnayna wax ka Bixiya.

4. Kuwaasaana ah Mu'miniinta Xaqa ah, waxayna Mudan Jannooyin Eebahood agtiisa ah, iyo Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

يَسْمَعُونَكَ عَنِ الْأَنْفَالِ قُلِ الْأَنْفَالُ لِلَّهِ وَالرَّسُولِ
فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَصْلِحُوا ذَاتَ بَيْنِكُمْ وَأَطِيعُوا
اللَّهَ وَرَسُولَهُ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿١﴾

إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَّت
قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا
وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٢﴾

الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ
يُسِفِقُونَ ﴿٣﴾

أُولَٰئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا لَهُمْ دَرَجَاتٌ عِنْدَ
رَبِّهِمْ وَمَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٤﴾

Dagaalkii waynaa ee Badar ee Dhexmaray Muslimiinta iyo Gaaladii yey ku oo Degtay Aayaddu, markay qaar Muslimiintii ka mida ku Hadleen Qaniimadii, waxaana Tawallin-Eebe oo loo lili Xaqa iyo Rasuulka (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) oo ku Bixin una qaybin Xaqa, Mase habboona in lagu Murmo, waase in Muslimiintu Eebe ka Dhawrsadaan, hagaajiyana Xaalka Dhexdooda ah, oyna Adeecan Eebe iyo Rasuulkiisa hadday Mu'miniin dhaba yihiin.

Aayadaha kale waxay Tilmaami Mu'miniinta Dhabta ah, Wanaagga kuwa kulansaday, Marka Eebe la Xuso qalbigoodaa Argagaxa oo Cabsada, Marka Quraanka lagu Akhriyana Iimaan u kordho, Eebe uun tala saarta, Salaadda Ooga, Waxna Bixiya, Kuwaasaana ah Mu'miniinta xaqa ah ee Dhabta ah, Mudanna Darajooyin Eebe Agtiisa, Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh. Al-Anfaal (1-4).

5. Siduu Kaaga Bixiyey Eebahaa Guri-gaaga si Xaq ah (Jahaad) Koox Mu'miniinta ka mida way Nacayeen.

كَمَا أَخْرَجَكَ رَبُّكَ مِنْ بَيْتِكَ بِالْحَقِّ وَإِنَّ فَرِيقًا
مِّنَ الْمُؤْمِنِينَ لَكَرِهُونَ ﴿٥﴾

6. Waxayna kugula Murmi Xaqa intuu

يَجِدُونَكَ فِي الْحَقِّ بَعْدَ مَا تَبَيَّنَ كَمَا أَنَّمَا يَسْفُونَ

u Cadaaday sidii iyagoo loo wado Geeri iyagoo Eegi.

إِلَى الْمَوْتِ وَهُمْ يَنْظُرُونَ ﴿٦﴾

7. Xusuuso makuu idiin Yaboohay Eebe Labadii Kooxood midkood (Colkii iyo Safarkii) inay idiin Sugnaatay, idinkoo Jecel in Midda Tabarta Yar idiin ahaato, Eebana wuxuu dooni inuu Xaqa ku sugo Kalimadiisa, Gooyana Cidhibta Gaalada.

وَأَذِيعِدْكُمْ اللَّهُ إِحْدَى الظَّالِمِينَ أَنَّهُمْ لَكُمُ
وَوَدُونَ أَنَّ عَذْرَاءَاتٍ الشَّوْكَةِ تَكُونُ لَكُمْ وَيُرِيدُ
اللَّهُ أَنْ يُحِقَّ الْحَقَّ بِكُلِّ مَنِيئِهِ وَيَقْطَعُ دَابِرَ
الْكَافِرِينَ ﴿٧﴾

8. Si uu Xaqa u sugo, una Buriyo Baadilka (Xumaanta), haba Naceen Dambiilayaashuye).

يُحِقَّ الْحَقَّ وَيَبِطِلَ الْبَاطِلَ وَلَوْ كَرِهَ
الْمُجْرِمُونَ ﴿٨﴾

Aayadahanna waxay ka Warrami Dagaalkii Waynaa ee Badar iyo in Dad ka mida Muslimiintii ay Nacayeen in loo Baxo Dagaalka, Eebese wuxuu u Yaboohay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelce) Labada Kooxood midkood oo ah Safarkuu Abuusufyaan Hoggaminayey ee Shaam ka yimid iyo Colkii waynaa ee Gaaladii Makaad, Inkastooy Mu'miniinta Jeclayd inay la Kulmaan Safarka, Eebaha Xigmadda lehse wuxuu Doonay inuu Xaqa Sugo, Xumaanta iyo Baadilkana Buriyo oo Jabiyo, Gaaladana Gummaado, Saasaana Dhacday Maalintaas oo Gaaladii Kibirsanayd ee Badnaa waxaa Jabiyey Mu'miniin yar, Gargaarka Eebana waa Mudantahay Ciddii Xaqa si Dhaba u Raacda ee Diinta Eebe ku Toosta. Al-Anfaal (5-8).

9. Xusuusta markaad ka Gargaar war-sanayseen Eebe oo uu idinku Ajiibay waxaan idinku Xoojin Kun Malaa'igta ka mida oo Israacraacsan.

إِذْ تَسْتَفِيئُونَ رَبِّكُمْ فَأَسْتَجَابَ لَكُمْ أَنِّي مُمِدُّكُمْ
بِآلِيفٍ مِّنَ الْمَلَائِكَةِ مُرَوِّفِينَ ﴿٩﴾

10. Wuxuu Eebe u Yeelay Bishaaro iyo inuu Xasilo Qalbigiinnu, Gargaarra waxaan Eebe Agtiisa ahayn ma aha, Eebana waa Adkaade Fal San.

وَمَا جَعَلَهُ اللَّهُ إِلَّا بُشْرَىٰ وَلِتَطْمَئِنَّ بِهِ
قُلُوبُكُمْ وَمَا النَّصْرُ إِلَّا مِنْ عِنْدِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ
عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿١٠﴾

11. Xusuustana markuu idinku Daboolay Hurdo aamminnimo Darteed, idinkagana soo Dejiyey Samada Biyo, inuu idinku Daahiriyo idinkagana Tegsiyo Waswaaska Shaydaanka iyo inuu ku Adkeeyo Quluubtiinna kuna Sugo Gommadihiinna.

إِذْ يَغْشِيكُمْ النُّعَاسُ أَمَنَةً مِنْهُ وَيُنزِلُ
عَلَيْكُمْ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً لِّيُطَهِّرَ كُفْرَهُمْ وَيُذْهِبَ
عَنْكُمْ رِجْسَ الشَّيْطَانِ وَلِيَرْبِطَ عَلَىٰ قُلُوبِكُمْ
وَيَسْتَبِيحَ بِهِ الْأَقْدَامَ ﴿١١﴾

12. Markuu u waxyoona Eebahaa Malaa'igta anaa idinla jira ee suga kuwa Xaqa Rumeeyey (Xoojiya) waxaan ku Tuuri Quluubta kuwa Gaaloobay Ar-

إِذْ يُوحِي رَبُّكَ إِلَى الْمَلَائِكَةِ أَنِّي مَعَكُمْ فَثَبِّتُوا
الَّذِينَ آمَنُوا سَأَتْلِي فِي قُلُوبِ الَّذِينَ كَفَرُوا

gagax ee ka Garaaca Luqunta korkeeda kana Garaaca Xubnaha faraha.

الرُّعْبَ فَاصْرُبُوا قَوْقَ الْأَعْنَاقِ وَأَصْرُبُوا مَهْمَهُمْ
كُلَّ بَنَانٍ ﴿١٣﴾

13. Maxaa yeelay waxay Khilaafeen Eebe iyo Rasuulkiisa, Ciddii Khilaafta Eebe iyo Rasuulkiisana Eebe waa u Ciqaab daranyahay.

ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ شَاقُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَمَنْ يُشَاقِقِ اللَّهَ
وَرَسُولَهُ فَإِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿١٣﴾

14. ee Arrintaas Dhadhamiya, Gaalana waxaa u Sugnaaday Cadaabka Naarta.

ذَلِكَ فَذُوقُوهُ وَأَنَّ لِلْكَافِرِينَ عَذَابَ
الْعَذَابِ ﴿١٤﴾

Dagaalkii Badar wuxuu ahaa Arrin aad u wayn, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) markuu dayey Asaxaabta oo Saddex Boqol iyo Dhawra iyo Gaaladii oo Kun ah yuu Qaabilay Qiblada Baryeyna Eebe isagoo Dhihi: Ilaahoow ii Fuli Yaboohaagii, Ilaahoow haddaad halaagto Kooxdan Islaamka ah Lagugu Caabudi maayo Dhulka Waligeed, Intuu Go'ii garabaha ka Dhaco oo Sayid Abuubakar ka Dhaho kugu Filan, wuxuuna Eebe ku xoojiyey Malaa'ig si loogu Bishaareeyo Mu'miniinta, Quluubtoodana loo Xasiliyo, Gargaarna Eebaa haysta, waxaana qabatay Muslimiinta Hurdo inayan Cabsan, Roob Daahiriyana wuu u soo Daayey Niyada u Adkeeyey, Lugahana u sugay, wuxuuna Eebe faray Malaa'igta inay Sugaan Mu'miinta Illeen Eebaa la jiree, kuna tuuri Niyadda Gaalada Argagax, iyo inay ka Garaacaan Madaxa iyo Faraha Illeen waxay Khilaafeen Eebe iyo Rasuulkiisii, Ciddii Khilaaftana waxay mudan Ciqaab Daran, Gaalana waxaa u sugnaaday Cadaabka Naarta, Saasuuna Eebe ugu Gargaaraa Mu'miniinta Dhabta ah. Al-Anfaal (9-14).

15. Kuwa Xaqa Rumeeyow hadaad la Kulantaan Kuwa Gaaloobay idinkoo isu soo Dhawaan ha u jeedinnina dabada (ha cararina).

يَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا لَقِيتُمْ الَّذِينَ كَفَرُوا
رَحَفًا فَلَا تُولُوهُمْ الْأَدْبَارَ ﴿١٥﴾

16. Ruuxii u Jeediya Maalintaas Daba-diisa (Carara) isagoon u Xeelaysanayn Dagaal ama ku biirayn Koox, wuxuu la Noqdaa Cadho Eebe, Hooygiisuna waa Jahannamo, iyadaana u Xun meel loo ahaado.

وَمَنْ يُولِهِمْ يُؤَمِّدِ دُبُرَهُ إِلَّا الْمُتَحَرِّفًا لِقِتَالِ
أُوْمْتَحَرِّفًا إِلَىٰ فِعْيَةٍ قَدْ بَاءَ بِغَضَبٍ مِنَ اللَّهِ
وَمَا أُولِيهِمْ جَهَنَّمُ وَيَسَّ الْمَصِيرُ ﴿١٦﴾

17. Idinku maydaan ku layn Gaalada (Xooggiinna) Eebaase laayey, mana aadan Ganayn markaad ganaysay Eebaase Ganay (ku Hagajiyey) inuu u Nicmeeyo Mu'miniinta Nicmo Wanaagsan, Eebana waa Maqle Og.

فَلَمْ تَقْتُلُوهُمْ وَلَكِنَّ اللَّهَ قَتَلَهُمْ وَمَا رَمَيْتَ إِذْ
رَمَيْتَ وَلَكِنَّ اللَّهَ رَمَىٰ وَلِيُبْلِيَ الْمُؤْمِنِينَ مِنْهُ
بَلَاءً حَسَنًا إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٧﴾

18. Arrinkaasi waa Fal Alle, walibana Alla wuu tabar yarayn dhagarta gaalada.

ذَلِكَ وَمَنْ يُؤْمِنْ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ
الْآخِرِ يَجْعَلْ لِكُلِّ عَمَلٍ حَسَنًا ﴿١٨﴾

Aayaduhu waxay Cadday inay ka Reeboontahay Mu'miinta markay Cadowgooda Gaalada ah Dagaal kula Kumlaan inay Cararaan oo Dhabarka u Jeediyann, Ciddii Carartana waxay Mudan Cadho Eebe waxayna u Dheelman Naarta Jahannamo ee u xun meel loo ahaado.

Marka laga reebo u Xeelaysi Dagaal ama ku Biirid iyo Dumid Koox kale oo Taageerta. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu ka midyeelay ka Cararka Jahaadka Toddobada Dadka Halaagta Naartana Galisa. Wuxuuna Eebe ku Mannadaystay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Gargaarkii iyo Guushii waynayd ee Badar iyo in Eebe si Dhaba ugu hagaajiyey uguna Toosiyey Tuuryadii Gaalada intay ka Jabaan oo laga Laayo, Illeen awoodda Eebaa lehe, Mu'miniintana wuxuu ugu Nicmeeyey Nicmo Wanaagsan, wuxuuna saas u falay inuu Jilciyo oo Tirtiro Dhagarta Gaalada, Colka Islaamka ah, Taasina waxay ku Tusin in Jahaadku Waajib adag yahay, Ciddii Muslima oo ka tagtana ay Mudan Dullii, Addoonsi iyo Tabar yari, Markiise Eebe lagu Xidhnaado, Diintana lagu Toosnaado Xaqana lagu Jahaado waxaa la heli Guul, Sharaf, Cisi, Dambi dhaaf iyo Jannadii Eebe ee Wanaagsanayd. Al-Anfaal (15-18).

19. Haddaad kala Xukumid Dalabteen Gaalooy waxaa idiin Yimid Gargaarkii (Nabiga) inaadse Reeboontaan yaa idiin Khayr roon, haddaad ku noqotaa Xumaantana waxaannu ku Noqon Gargaarka (Nabiga) waxna idiinma tarayso Kooxdiiinna haba badnadeene Eebana wuxuu la Jiraa Mu'miniinta.

إِنْ تَسْتَفْتِحُوا فَقَدْ جَاءَكُمْ الْفَتْحُ وَإِنْ تَنْتَهُوا
فَهُوَ خَيْرٌ لَكُمْ وَإِنْ تَعُودُوا نَعُدْ وَلَنْ نُغْنِيَ عَنْكُمْ
فِتْنَتَكُمْ شَيْئًا وَلَوْ كُنتُمْ وَآتَ اللَّهُ مَعَ
الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٩﴾

20. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Adeeca Eebe iyo Rasuulkiisa hana ka Jeedsani-na idinkoo Maqli.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اطِّعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ
وَلَا تَوَلَّوْا عُنْفَهُ وَأَنْتُمْ تَسْمَعُونَ ﴿٢٠﴾

21. Hana Noqonnina kuwii Yidhi Maqallay iyagoo wax Maqlayn.

وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِينَ قَالُوا سَمِعْنَا وَهُمْ
لَا يَسْمَعُونَ ﴿٢١﴾

22. Dhul Socod waxaa ugu Shar badan (U xun) Eebe agtiisa ma Maqle (Xaqa) ma hadle oon kasayn (Wanaagga).

* إِنْ سَرَ الدَّوَابَّ عِنْدَ اللَّهِ الضَّرُّ الْبَيْسُ الَّذِينَ
لَا يَقُولُونَ ﴿٢٢﴾

23. hadduu ku Ogyahay Eebe Khayr wuu maqashiin lahaa (Garansiin lahaa) hadduuse Maqashiiyo way Jeedsan lahaayeen (Kibir dartiis) iyagoo is dadbi.

وَلَوْ عَلِمَ اللَّهُ فِيهِمْ خَيْرًا لَأَسْمَعَهُمْ وَلَوْ أَسْمَعَهُمْ
لَتَوَلَّوْا وَهُمْ مُّعْرِضُونَ ﴿٢٣﴾

24. Kuwa Xaqa Rumeeyow Maqle Eebe iyo Rasuulka Markuu idiinku Yeedho wax idin nooleeya (XAQA) Ogaadana in Eebe (Karo) inuu kala Dhexmaro Ruuxa iyo Qalbigiisa, oo Xaggiisa laydiin soo Kulmin.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اسْتَجِيبُوا لِلَّهِ وَلِلرَّسُولِ
إِذَا دَعَاكُمْ لِمَا يُحْيِيكُمْ وَعَلِمُوا أَنَّ اللَّهَ يَحُولُ
بَيْنَ الْمَرْءِ وَقَلْبِهِ وَأَنَّهُ إِلَهُ الْبَشَرِ مُخْتَصِرٌ ﴿٢٤﴾

Gaaladii Carbeed waxay Eebe warsan Jireen isla wayni Darteed in Eebe Halaago Ciddii Xumaan wadda iyaga iyo Mu'miniinta, waxaana u yimid waxay warsanayeen Maalintii Badar, waana la halaagay, inay Xumaanta ka joogaan yaana u Khayrroon, Hadday ku Noqdaanna Eebe wuxuu u Gargaari Mu'miniinta Dhabta ah, waxaana laga rabaa Mu'miniinta inay si run ah u Adeecaan Eebe iyo Rasuulkiisa, Xaqana raacaan, oyna la mid Noqon kuwa Dhaha waan maqalay iyagoon Maqlin, waxaana ugu Liita Eebe Agtiisa waxa Dhulka ku socda cid Xaqa ka Dhaga la', oo ka Afka', oon Garanaynoo markii xaqa loo sheego ka Jeedsata, Dadka Mu'miniinta ahse waa inay Maqlaan oo yeelaan Eebe iyo Rasuulkiisa Markuu wax nooleeya oo Diinta islaamka ah iyo xaqa ugu Yeedho, Illeen waa Nolole, waxa ka soo hadhayna waa Geeriye, Arrintana Eebaa haysta oo Toosin Cidduu doono oo wanaagga ku Dadaasha, Xaggiisaana laysu Kulmin. Saas darteed Ciddii Nolol, Wanaag, Sharaf iyo Khayr rabta ha Raacdo Quraanka iyo Xaqa. Al-Anfaal (19-24).

25. Ka Dhawrsada Fidmo oon ugu Dhacayn kuwii Dulmiga falay Gaar ahaan oo idinka mida, Qgaadana in Eebe Ciqaabtiisu Darantahay.

وَأَعْرَفْنَاهُ أَتَىٰ الَّذِينَ ظَلَمُوا
مِنْكُمْ خَاصَّةً وَأَعْمَوُا أَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ
الْعِقَابِ ﴿٢٥﴾

26. Xusuustana markaad ahaydeen kuwo yaroo lagu Tabar darraysto Dhulka (Makaad) idinkoo ka Cabsan in Dadku idin dafo oo markaas uu idin Dhaweeyay (Dumay) idinkuna Xoojiyey gargaarkiisa, idinkuna Arzaaqay Wanaag (Xalaal) inaad ku Mahdisaan.

وَأَذَكُرُ وَإِذَا أَنْشُرْ قَلِيلٌ مُّسْتَضْعَفُونَ فِي الْأَرْضِ
تَحْفَاؤُونَ أَنْ يَبْسُطَ كَفْرُ النَّاسِ فَاوَدَّكُمْ وَأَيْدِيكُمْ
يَبْصُرُهُمْ وَيَرْزُقُكُمْ مِنْ الظَّهْرِ لَعَلَّكُمْ
تَشْكُرُونَ ﴿٢٦﴾

27. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha khayaamina Eebe iyo Rasuulka iyo Ammaanadiinna idinkoo Og.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَاتُخَوِّفُهُمْ وَالرَّسُولَ وَتَحْوَنُوا
أَمْتِيكُمْ وَأَنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٧﴾

28. Ogaadana in Xoolihiinnu iyo Caruurtiinnu Fidno uun yihiin oo Eebe Agtiisa Ajir wayn yahay.

وَأَعْمَلُوا إِنَّمَا أَمْوَالُكُمْ وَأَوْلَادُكُمْ فِتْنَةٌ وَاللَّهُ
عِنْدَهُ أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿٢٨﴾

29. Kuwa (XAQA) Rumeeyow haddaad ka Dhawrsataan Eebe wuxuu idiin yeeli Faraj (iyo Nabadgalyo) wuxuuna Asturi Xumaantiinna «Dambigiinna», Wuuna idiin Dhaafi Eebana waa Fadli Wayne.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِنْ تَتَّبِعُوا اللَّهَ يَجْعَلْ
لَكُمْ فُرْقَانًا وَيُكَفِّرْ عَنْكُمْ سَيِّئَاتِكُمْ
وَيَغْفِرْ لَكُمْ وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ الْعَظِيمِ ﴿٢٩﴾

Xumaanta haddaan layska reebin kuma kaliyeysato Adduunka Ciddii Fashay kaliya, ee way wada heli Ciddii ku Dhaw oon Xumaanta Reebin Sida Xadiithyo Badan ku sugnaaday, waana arrin ay waajibtahay in si dhaba loo garto looguna camal falo. Tan kale waxay ahaayeen Muslimiintii Markaad kuwo tabar yar oo Cabsada Eebaase Xoojiyey oo Madiino Dejijey oo Gargaaray, oo Rizqi Fiican ku Arzaaqay, waana wax la Xusuusto oon la halmaami Karin tan kale waa inaan la Khayaamin Eebe, Diinta, Nabiga, Ammaanada iyo Xaqa isagoo la ogyahay, lana garto in Xoolaha iyo Caruurtu Fidmo iyo Imtixaan yihiin ee Wanaag iyo Ajir Eebe Agtiisa yaallo, Ciddii si Fiican u Dhawrsatana Eebe wuxuu u Furi Faraj, Wuuna Asturi, una Dambi Dhaafi Illeen Fadligiisaa Waasac ahe, isagaana Awoodda lehe. Al-Anfaal (25-29).

30. Xusuuso (Nabiyow) markay ku dhakrayeen Kuwii Gaaloobay inay ku Xidhaan, ama ku Dilaan ama ku Bixiyaan, way ku Dhakrayeen Eebaase dhakrayey, isagaana inta wax dhagarta u Khayr roon.

وَإِذْ يَمْكُرُ بِكَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِيُبْسِلُوكَ أَوْ يُسْقُوكَ
أَوْ يُخْرِجُوكَ وَيَمْكُرُونَ وَيَمْكُرُ اللَّهُ وَاللَّهُ خَبِيرٌ
الْمَكْرِينَ ﴿٣٠﴾

31. Marka lagu Akhriyo Aayaadkanna-ga waxay Dhahaan waan maqallay haddaan doonnana waan Dhahaynaa kanoo kale (Quraanka), kanu waxaan warkii kuwii hore ahayn ma aha.

وَإِذْ أَنْتَلَى عَلَيْهِمُ آيَاتِنَا قَالُوا قَدْ سَمِعْنَا لَوْ نَشَاءُ
لَقُلْنَا مِثْلَ هَذَا إِنْ هَذَا إِلَّا أَسْطِيرٌ
الْأُولَى ﴿٣١﴾

32. Xusuuso markay Dheheen Eebow hadduu kanu Xaqa Agtaada ah yahay Nagaga soo daadi Dhagaxyo (Naara) Samada, ama noo keen Cadaab daran.

وَإِذْ قَالُوا اللَّهُمَّ إِنْ كَانَ هَذَا هُوَ الْحَقُّ مِنْ
عِنْدِكَ فَأَمْطِرْ عَلَيْنَا حِجَابَ مِنَ السَّمَاءِ
أَوْ أُنزِلْ عَلَيْنَا آيَاتٍ ﴿٣٢﴾

33. Eebase ma aha kii Cadaaba Adoo Dhexjooga, mana aha mid Cadaaba iyagoo Dambi dhaaf warsan (oo Gaal-nimo ka soo noqon).

وَمَا كَانَ اللَّهُ لِيُعَذِّبَهُمْ وَأَنْتَ فِيهِمْ وَمَا كَانَ
اللَّهُ مُعَذِّبَهُمْ وَهُمْ يَسْتَغْفِرُونَ ﴿٣٣﴾

Gaaladii Qureesheed Dhagarbay u sameeyeen Nabigii (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Waxayna ku Shireen Daarua Nadwa markay wax badan hadleenna waxaa Arrin soo Jeediyey Abuu Jahal wuxuuna soo Jeediyey in Meel kasta Wiil Xoog leh laga keeno markaas Seefo loo Dhiibo Nabigana hal mar kuwada Dhuftaan si qaraabadiisu Mag u qaadato Illeen lama Colloobi karaan Dadkoo dhane, waxayna isku waafaqeen Ra'yigaas, Eebaase Ogaysiiyey Nabigiisa Arrintiina Gacantooda ka Bixiyey oo Nabadgaliyey Nabigi, waana kii baxay ee Godka galay isaga iyo Sayid Abuu Bakar, ka dibna Madiina aadeen. Waxayna ahaayeen Gaaladaasu kuwa marka lagu Akhriyo Quraanka Yidhaahda Maqallay, haddaan doonno waan dhihi lahayn isagoo kale, waana warkii dadkii hore, waxayna Codsadeen in Eebe Cadaab Cirka kaga soo daayo Hadduu Quraanku Xaq yahay, Taasina waa Doqonimo, wax Eebe la warsadana ma aha, ee waxaa habboon in la dhaho Allow nugu hanuuni Xaqa, Allase ma cadaabo Nabigoo Dhex Jooga ama iyagoo Dambi Dhaaf warsan, Illeen way dawaafi jireene.

Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Waxaa Jiray Labo Ammaan, Nabigii iyo Dambi Dhaaf warsasho, waxaase tegey Nabigii waxaana hadhay Dambi dhaaf Doonidii. Al-Anfaal (30-33).

34. muxuusanse Eebe u Cadaabayn iyagoo ka Celin Dadka Masjidka Xurmada leh, mana aha Ehelkiisa, Ehelkiisu waxaan kuwa dhawrsada ahayn ma aha, Badankoodse ma Oga.

وَمَا لَهُمْ آلَا يُعَذِّبُهُمُ اللَّهُ وَهُمْ يَصُدُّونَ عَنِ
الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَمَا كَانُوا أَوْلِيَاءَهُ إِنْ أَوْلِيَاءُؤُهُ
إِلَّا الْمَنَافُونَ وَلَكِنْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٤﴾

35. Salaaddooda Kacbada agteeda Ahna ma aha waxaan Foodhi iyo Sacabbo Tumid ahayn, ee Dhadhamiya Cadaabka Gaalnimadiinna Darteed.

وَمَا كَانَ صَلَاتُهُمْ عِنْدَ الْبَيْتِ إِلَّا مُكَاءً
وَتَصْدِيَةً فَذُوقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنْتُمْ
تَكْفُرُونَ ﴿٣٥﴾

36. Kuwii Gaalobay waxay ku Bixin Xoolahooda inay ka Celiyaan Dadka Jidka Eebe, way Bixin doonaan waxayna ku noqon Qoomammo, markaasaa laga Adkaan, kuwa Gaalobayna Xagga Jahannamaa Loo kulmin.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا يُضِلُّونَ أَمْوَالَهُمْ لِيَصُدُّوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ فَسَيُفْقَهُنَّ ذَلِكَ تَكُونَ عَلَيْهِمْ حَسْرَةً تُمْ يَغْلِبُونَ ۖ وَالَّذِينَ كَفَرُوا إِلَىٰ جَهَنَّمَ يُحْشَرُونَ ﴿٣٦﴾

37. in Eebe kala Bixiyo Xumaanta iyo Wanaagga, Yeelana Xumaanta Qaarkeed tan Kale Korkeeda uuna Kulmin Dhammaan uuna Yeeli Jahannamo, kuwaasuna waa uun kuwa Khasaaray.

لِيَحْذِرَ اللَّهُ الْحَيْثَ مِنَ الطَّيِّبِ وَيَعْمَلَ الْخَيْثَ بَعْضُهُ عَلَىٰ بَعْضٍ فِرْكَهُ جَمِيعًا فَيَجْعَلَهُ فِي جَهَنَّمَ أُولَٰئِكَ هُمُ الْخَاسِرُونَ ﴿٣٧﴾

Gaaladu way Mutaan Ciqaabta iyo Cadaabkaba, Illeen waxay dadka ka Celiyaan Masaajidka Xurmaysan, oo ayna Mudnayn inay Daris la Noqdaan waxaase Mudan inuu Gacanta ku hayo Muslimiinta. Gaaladuna Dhab ahaan ugama yaabaan Eebe, Cibaadadooduse waa Foodhi, Buuq iyo Sacabbo Tun, Abaalkooduna waa Cadaab Gaalnimadooda Darteed, waxay Gaaladu Bixin oo Xoola ah inay Jidka Eebe ka Leexiyaan, way Bixin waxayse ku Noqon Khasaare, waana laga Adkaan, Naarta Jahannamaa waa lagu Kulmin, si Eebe u kala saaro Xumaanta iyo Wanaagga, Xumaanta wuu Kulmiyaa Dhammaanna yeelaa Naarta Jahannamo, waana kuwa Khasaaray.

Ibnu Isxaaq wuxuu sheegay in Cabdullahi Binu Rabiica, Cigrama Abu Jahal iyo Safwaan Binu Umayya u Tageen Abii Sufyaan Dagaalkii Badar ee lagu Laayey Qaraabadoodii inay oggolaadaan Safarkii Abu Sufyaan Hoggaaminayey ee Dagaalku ku Billowday Xoolihiisa in lagu Bixiyo la Dagaallanka Nabiga iyo Muslimiinta, markaasaa waxaa soo Degtay Aayadahan.

Badar bay ku soo Degeenna waa la Yidhi, waxaase Dhaba in Gaalo Khasaari. Al-Anfaal (34-37).

38. Ku Dheh Kuwii Gaalobay hadday ka Reebootmaan (Gaalnimada) waxaa loo Dhaafi wixii hor maray, haddayse Daa'imaan (Gaalnimada) waxaa tagtay «horraysay» Jidkii kuwii hore.

قُلْ لِلَّذِينَ كَفَرُوا إِنْ سَأَلْتَهُمْ بِعَفْوِهِمْ مَا قَدْ سَأَلَتْ وَإِنْ يَعُودُوا فَقَدْ مَضَتْ سُنتُ الْأَوَّلِينَ ﴿٣٨﴾

39. la Dagaallama Gaalada intaan Gaalnimo iyo «Xumaan» laga helin, una ahaato Diintu Dhammaan Eebe, hadday Reebootmaan Eebe waxay Fali wuu Arkayaa.

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّىٰ لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِلَّهِ فَإِنَّ اللَّهَ بِمَا يَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٣٩﴾

40. Hadday Jeedsadaanna ogaada in Eebe yahay Gargaarihiinna, isagaana u Fiican Gargaare.

وَإِنْ تَوَلَّوْا فَأَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ مَوْلَاهُمْ يَوْمَ الْمَوْتِ وَيَعْمَرُ النَّصِيرُ ﴿٤٠﴾

41. Ogaadana waxaad Qaniimaysataan in Eebe Shan Meelood Meel Leeyahay, iyo Rasuulku, iyo Qaraabada, iyo Agoonta, iyo Masaakiinta, iyo Socdaalka, haddaad tihiin kuwo Rumeeyey

۞ وَأَعْلَمُوا أَنَّمَا غَنِمْتُمْ مِنْ شَيْءٍ فَإِنَّ لِلَّهِ خُمُسَهُ. وَلِلرَّسُولِ وَلِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسْكِينِ وَابْنِ السَّبِيلِ إِنْ كُنْتُمْ عَامِنْتُمْ بِاللَّهِ وَمَا أُنزِلْنَا

Eebe iyo waxaan ku Dejinnay Addoon-kanaga Maalintii kala Bixinta, Maalintay kulmeen Labadii Col (Badar) Eebana wax kasta wuu karaa.

عَلَىٰ عَبْدِنَا يَوْمَ الْفُرْقَانِ يَوْمَ التَّلَاقِ أَجْمَعَاتٍ ۗ وَاللَّهُ
عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤١﴾

Eebe waa Naxariiste wuxuuna u Dhaafaa wixii hore Ciddii Gaalnimada ka soo Noqota oo Xumaanta ka Toobad keenta, sida ku Sugnaatay Xadiith: Islaamku wuu Tiraa wixii ka horreeyey, toobadduna way Tirtaa wixii ka horreeyey, Ciddii Xumaan ku Noqota way Caddahay Waddadii Kuwii hore. Waana in Gaalada lala Dagaallamo intaan Xumaan laga helin, Diintuna Dhammaan Eebe u ahaato, ciddii Xumaanta ka Joojtana Eebe wuu arkaa, Ciddii Jeedsatana Eebaa uga gargaari Mu'iniinta, Kaalmeeye iyo Gargaarana Eebaa u Fiican. Wixii Gaalada laga helo waqtiga Dagaalkana Shan Meelood Meel waxaa loo iili Jidka Eebe iyo Rasuulkiisa, qraabada Nabgia oo Sako la siinayn, Agoonta, Masaakiinta, iyo Socdaalka, haddii Dhab loo Rumeeyey Eebe iyo Quraanka, waana Xoolo Xalaala oo lagu Xoojin Islaamka iyo Xaqa, laguna Wiiqi Gaalada. Al-Anfaal (38-41).

42. Xuxuusta markaad ahaydeen Dhinicii u Dhawaa (Badar) Gaaladuna ahayd Dhinicii ka Fogaa (Badar) Safarkiina idinka Hooseeyey hadaad isu yaboohdaan (Ballanna) waad is ku Khilaafi lahaydeen Ballanka, Eebaase Falay inuu Xukumo Amar uu Fali, in Ciddii Halaagsamina si Cad u Halaag-santo, Ciddii Noolaanna si cad u Noolaato, Eebana waa Maqle Og.

إِذْ أَنْتُمْ بِالْعُدُوِّ الدُّنْيَا وَهُمْ بِالْعُدُوِّ الْقُصْوَىٰ
وَأَنْتُمْ كَرِبٌ أَسْفَلَ مِنْكُمْ وَلَوْ تَوَاعَدْتُمْ
لَاخْتَفَلْتُمْ فِي الْمَيْعَادِ وَلَكِنْ لِيَقْضِيَ اللَّهُ
أَمْرًا كَانَ مَفْعُولًا لِيَهْلِكَ مَنْ هَلَكَ
عَنْ بَيْتِنَا وَيُنصَبَ مِنْ حَتَّىٰ عَنْ بَيْتِنَا ۗ وَإِنَّ اللَّهَ
لَسَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٤٢﴾

43. Markuu idinku Tusiyeey Eebe Gaalada Hurdada iyagoo yar, hadduu ku Tusiyo Iyagoo Badanna waad Fashili lahaydeen ood ku Murmi lahaydeen Amarka, Eebaase Nabadgaliyey, Illeen wuu Ogyahay waxa Laabta ku Sugane.

إِذْ يُرِيكُمُ اللَّهُ فِي مَتَابَعِكُمْ قَلِيلًا
وَأَوَّازَكُمْ لَهُمْ كَثِيرًا فَقَشَشْتَهُمْ وَلَتُنزَعُنَّ فِي
الْأَمْرِ وَلَكِنَّ اللَّهَ سَلَّمَ إِنَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ
الْصُّدُورِ ﴿٤٣﴾

44. Iyo markuu idin Tusiyeey markaad Kulanteen iyagoo ku Yar indhihiinna, idinkuna yareeyey Indhahooda in Eebe Xukumo Amar uu Fali, Xagga Eebaana loo Celin Umuuraha.

وَإِذْ يُرِيكُمُوهُمْ إِذِ التَّفَيُّمِ فِي أَعْيُنِكُمْ قَلِيلًا
وَيُقَالُ لَكُمْ فِي أَعْيُنِهِمْ لِيَقْضِيَ اللَّهُ أَمْرًا كَانَ
مَفْعُولًا وَإِلَى اللَّهِ تُرْجَعُ الْأُمُورُ ﴿٤٤﴾

Muslimiintu waxay Degeen Daanta Badar ee Xigta Xagga Madiino, Gaaladuna Xagga Maka Jahadeeda, Safarkiina Maray Xagga Badda, Eebana Kulmiyey si Ciddii Halaagsami iyo tan Noolaanta Xaalku u Caddaado, Wuxuuna Eebe isu Muujiyey Labada Kooxood iyadoo midba la yartahay midda kale, in Eebe sugo Guusha Islaamka, Saasayna u Kulmeen Labadaas Col, oo midna Xaqa iyo Islaamka Matalayo, midka kalana Gaalnimo iyo Isla wayni, Wuxuuna Ibnu Jariir Sheegay in Abuu Sufyaan u Ciddiray Gaaladii Qureesheed kuna yidhi: Noqda waa nabadgalayey, waxaase Diiday Abuu Jahal oo

sheegay inayna Noqonayn intay ka tagaan ceelka Badar, Saddex maalmoodna ku nagaadaan oo cunno ku cunaan, geelna ku qashaan, Khamrana ku Cabbaan, Gabduhuna Durbaan u Garaacaan oo Carabtuna Maqasho, Qaddariyaanna, Nabiguna wuxuu Yidhi: Maka waxay idinku soo Tuurtay Beerkeedii, waana kaas Xaq iyo Xumaan. Al-Anfaal (42-44).

45. Kuwa Xaqa Rumeeyow haddaad la Kulantaan Koox (Cadow ah) Sugnaada, Xusana Eebe wax Badan, inaad Liibaantaan.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذَا لَقِبْتُمْ فَتَوَفَّاهُمْ فَأَنْتُمْ أَوَّاءٌ
وَأَذْكُرُوا لِلَّهِ كَثِيرًا لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٤٥﴾

46. Adeecana Eebe iyo Rasulkiisa hana Murmina ood Fashishaan, uu tagana Xooggiinnu, Samra, Eebe wuxuu la jiraa kuwa Samree (Adkaysta).

وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَلَا تَسْرِعُوا الْقَوْلَ فَتَكُونُوا
فَرِحِينَ بِمَا آتَاكُمْ مِنَ الْقُرْآنِ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٤٦﴾

47. Hana ka mid Noqonnina kuwii ka baxay Guryahooda Kibir iyo istuska Dadka Dartiis kana Celinaya (Dadka) Jidka Eebe, Eebana waa Koobay waxay Camal Fali.

وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِينَ خَرَجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ بَطَرًا وَرِئَاءَ
النَّاسِ وَيَصُدُّونَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ وَاللَّهُ يَمَّا
يَعْمَلُونَ مُجِيطٌ ﴿٤٧﴾

48. Markuu u Qurxiyey Shaydaanku Camalkooda kuna Yidhi wax idinka Adkaan oo Dada ma jiro Maanta, anna Kaalmeeyaan idiin ahay, markay is arkeen Labadii Kooxoodna wuxuu u gurtay Cidhibtiisa, wuxuuna yidhi: anugu Bari baan idinka ahay, waxaana arkaa waxaydaan Arkin, waxaana ka Cabsan Eebe, Ilaahyna waa Ciqaab darane.

وَلَا تَزِنَ لَهُمُ الشَّيْطَانُ أَعْمَالَهُمْ وَقَالَ لَا غَالِبَ
لَكُمْ الْيَوْمَ مِنَ النَّاسِ وَإِنِّي جَارٌ لَكُمْ فَلَمَّا
تَرَآتِ الْفَيْتَانِ نَكَصَ عَلَى عَقَبَيْهِ وَقَالَ إِنِّي
بَرِيءٌ مِنْكُمْ إِنِّي أَزِيدُ مَا لَا تَزُرُونَ إِنِّي
أَخَافُ اللَّهَ وَاللَّهُ شَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿٤٨﴾

49. Markay dhahayeen Munaafiqiintu iyo kuwa Cudurku Qalbiga kaga jiro, waxaa Dhagray Kuwaas Diintooda, Ciddii Eebe tala saarata Ilaahay waa Adkaade Falsan.

إِذْ يَقُولُ الْمَتَفَقِّهُونَ وَالَّذِينَ فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ
عَرَهُمْ أُولَءِ دِيْنُهُمْ وَمَنْ يَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ فَإِنَّ
اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٤٩﴾

Waa in la sugnaado marka Colka lala Kulmo oon la Cararin, Eebana la Xuso, lana Adeeco Eebe iyo Rasulkiisa, lana Murmin si aan loo fashilin loona Tabar yaraan, waana in la adkaysto Ileen Eebe wuxuu la Jiraa Cidda Adkaysatec, lana Mid noqonnin sidii Gaaladii reer makaad ee Kibirka iyo is Tustuska Dadka iyo Xaqa ka Leexintiisa u soo Baxday, Shaydaanna u Qurxiyey Camalkooda una Sheegay inaan laga Adkaanayn, una Gargaari, Markay labadii Col Kulmeenna Dib u Gurtay, Sheegayna inuu Arko waxayna Arag, Sheegayna inuu Eebe Ka yaabi isagoo Been sheegi, Munnafiqiinta iyo Kuwa Qalbiga ka Bukana ku Sheegi Mu'iniinta in Diintoodu Khaladday, Beenna u Sheegtay, Ciddiise Eebe tala Saarata Isagaa Adkaada ah Falsan, waxaana muuqda in la adkaysto Eebana lagu Xidhnaado, Kibir, Istus, iyo Shaydaanna laga Fogaado. Al-Anfaal (45-49).

50. Haddaad Aragto Markay Oofsan (Nafta ka qaadi) Malaa'igtu kuwii Gaalobay oy ka Garaaci Wajiyadooda iyo Gadaashooda iyagoo ku Dhihi Dhadhamiya Cadaabka Gubidda (waxaad arki lahayd Arrin wayn).

وَلَوْ تَرَىٰ إِذِ يَتَوَفَّى الَّذِينَ كَفَرُوا الْمَلَائِكَةَ يَتْرُوبُونَ وَجُوهَهُمْ وَأَدْبَارَهُمْ وَذُفُوعًا عَدَابِ الْحَرِيقِ ﴿٥٠﴾

51. Arrintaasuna waa waxay hormarsatay Gacmihiinnu darteed Eebana ma Dulmiyo Addoomada.

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمْتُمْ أَيْدِيَكُمْ وَأَنْتُمْ اللَّهُ لَيْسَ بِظَالِمٍ لِّلْعَمِيدِ ﴿٥١﴾

52. Waa Caadadii Fircoon Qomkiisii iyo kuwii ka horreeyey ee ka Gaalobay Aayaadkii Eebe oo Eebe Qabtay Dambigooda Dartiis, Eebana waa Xoog badane Ciqaab daran.

كَذَّابٌ ءَالٍ فِرْعَوْنَ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ كَفَرُوا بِآيَاتِ ٱللَّهِ فَآخَذَهُمُ ٱللَّهُ بِذُنُوبِهِمْ إِنَّ ٱللَّهَ قَوِيٌّ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٥٢﴾

53. Arrintaasna waa inaan Eebe doorrinnin Nicmo uu ugu Nicmeeyey Qoom intay ka Dooriyaan waxa Naftooda ah, Eebana waa Maqle Og.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ لَم يَكُ مُغَيِّرًا نِّعْمَةً أَنْعَمَهَا عَلَىٰ قَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا مَا بِأَنفُسِهِمْ وَأَنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٥٣﴾

54. Waa Caadadii Fircoon Qoomkiisii iyo kuwii ka Horreeyey, waxay ka Gaaloobeen Aayaadkii Eebahood markaasuu Halaagay Dambigooda Dartiis waxayna Dhammaan ahaayeen Daalimiin.

كَذَّابٌ ءَالٍ فِرْعَوْنَ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ كَذَّبُوا بِآيَاتِ رَبِّهِمْ فَأَهْلَكْنَاهُمْ بِذُنُوبِهِمْ وَأَغْرَقْنَا ءَالَ فِرْعَوْنَ وَكُلًّا كَانُوا ظَالِمِينَ ﴿٥٤﴾

Geeridu waa wax wayn, Saas darteed yuu Eebe u sheegay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalo Eebe korkiisa ha yeelee) in hadduu arko Gaalada oo Malaa'igtu Nafta ka Qaadi kana Garaaci Wajiga iyo Gadaasha kuna Dhihi Dhadhamiya Cadaabka Gubidda inuu Arki lahaa Arrin wayn, waana waxay hormasadeen Gacmahoodu Illeen Eebe ma Dulmiyo Addoomadee, waxayna la midyihiin Fircoon iyo Dadkiisii iyo kuwii ka horreeyey ee ka Gaaloobay Aayaadka Eebe oo Eebe qabtay Dambigoodii dartiis, Eebana Waa Xoog badane Ciqaabtiisuna darantahay, waxaana ugu wacan inaan Eebe Dad ka Doorinin Nicmo uu ugu Nicmeeyey intay Naftooda ka Dooriyaan, Dambina falaan, Illeen Eebe waa Maqle Oge, Sidaasna waxaa falay Fircoon iyo Dadkiisii iyo kuwii ka horreeyey oo Beeniyey Aayaadkii Eebe markaasna Eebe Halaagay Dambigooda Dartiis, Fircoon iyo Colkiisiiina wuu Maansheeyey illeen Daalimiin bay ahaayene. Al-Anfaal (50-54).

55. Dhul Socde waxa ugu Shar badan Eebe Agtiisa kuwa Gaalobay oon Rumeynin.

إِنَّ شَرَّ ٱلَّذِينَ عِنْدَ ٱللَّهِ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٥٥﴾

56. ee ah Kuwaad la Ballantay markaas Buriya Ballankooda mar kasta, oon Dhawrsanayn.

ٱلَّذِينَ عَاهَدتْ مِنْهُمْ ثُمَّ يَنْقُضُونَ عَهْدَهُمْ فِي كُلِّ مَرْقَبٍ وَهُمْ لَا يَتَّقُونَ ﴿٥٦﴾

57. Haddaad ku Liibaanto (Adkaato) Dagaalka ku Eri (xanuuji) kuwa ka Dambeeya inay Xusuustaan.

فَمَا تَتَفَتَّهُمْ فِي الْحَرْبِ فَشَرِّبُوهُمْ مِّنْ حَلْفِهِمْ أَلْفَهُمْ
يَذَكَّرُونَ ﴿٥٧﴾

58. Haddaad ka Cabsato Qoom Khayaanadii u Tuur (Ogaysii) Ballankii si siman, Illeen Eebe ma Jecla Khaa'i-miinta.

وَأَمَّا خِفَافٌ مِّنْ قَوْمٍ حِيَانَةٌ فَأَنْذِرْ إِلَيْهِمْ عَلَى
سَوَاءٍ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْفَرَّانِينَ ﴿٥٨﴾

59. Yeyna u malayn kuwii Gaaloobay inay Carari (Karaan) iyagu ma Daa-liyaan (Eebe).

وَلَا يَحْسَبَنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا سَبَقُوا إِذْ هُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٩﴾

60. Ugu Darbada waxaad kartaan oo Xooga, iyo Darbidda Fardaha inaad ku Cabsi galisaan Colka Eebe iyo Colkiinna (Gaalada) iyo kuwa kale oo ka soo hadhay (Munaafiqiinta) ma ogidin Ee-baase Og, waxaad ku Bixisaan Jidka Eebana waa laydiin oofin (Dhammayn) idinkoon laydin Dulmiyeyn.

وَأَعِدُّوا لَهُمْ مَا اسْتَطَعْتُمْ مِنْ قُوَّةٍ وَمِنْ رِبَابِ
الْحَيْلِ تُرْهِمُونَ بِهِ عَدُوَّ اللَّهِ وَعَدُوَّكُمْ
وَأَآخِرِينَ مِنْ دُونِهِمْ لَا تَعْلَمُوهُمْ اللَّهُ يَعْلَمُهُمْ
وَمَا تُنْفِقُوا مِنْ شَيْءٍ فِي سَبِيلِ اللَّهِ يُوَفَّ إِلَيْكُمْ
وَأَنْتُمْ لَا تَنْظَمُونَ ﴿٦٠﴾

Aayadahanna wuxuu Eebe ku sheegay in waxa Dhulka ku socda ugu Liito Gaalada Beenisay Xaqa, een waliba Rumaynayn, oo Buriya Ballanka Nabiga markasta oon Dhawrsanaynna, Eebaana Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalo Eebe korkiisa ha yeelee) in Cidduu ka helo kuwaas Dagaalka uu Xanuunjiyo si kuwa ka Dambeeya u Cabsadaan, una Xusuustaan, Hadduu Khayaanadooda ka Yaabana uu ogaysiiyo inuu Ballankoodii u Celiyey Aaminaynna mar kale, Illeen Eebe ma Jecla Khaa'imiintee, Yeyna u malayn Gaaladu inay Eebe ka Carari Karaan Wuxuuna Eebe faray Muslimiinta inay u Darbadaan Dagaalka Gaalada una hub samaystaan, iyagoo ku Cabsi galin Gaalada colka u ah Alle iyo Muslimiinta, kuwa la ogyahay iyo kuwa Eebe uun Ogyahay, Jidka Eebana wax lagu Bixiyo, si Eebe ugu oofiyo Wanaagga oon loona Dulmiyin. Waxaana ku soo Arooray Wanaagga Dagaal Barashada iyo Hubka Xadiithyo badan sida: Fardaha Fuuliddooda waxaa lagu Xidhay Khyar tan iyo Qiyaamada, iyo Gana oo kora Ganiddaana ka Khayr roon Koridda. Taasina waxay muujin inay Waajib tahay in loo Darbado Jahaadka iyo daaficidda Diinta. Xoolaha, Dhulka iyo Sharafka, markay ka tageen Muslimiintuna Amarkii Eebe yey Dulloobeen, Gaalana u Talisay, Jahaad umbaana ka Saari kara. Al-Anfaal (55-60).

61. Hadday u Iishaan Gaaladu Nabad u Iilo adna, talana Saaro Eebe, Illeen isagaa uun Maqla ognee.

﴿وَلَنْ جَنَّتِ السَّلَامُ فَاجْتَمَعَتْ لَهَا وَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ
إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٦١﴾﴾

62. hadday Doonaan inay ku Dhagraan waxa Kaafiyahaaga ah Alle, Eebaha kugu Xoojiyay Gargaarkiisa iyo Mu'-'miniinta.

﴿وَلَنْ يُرِيدُوا أَنْ يَخْدَعُوكَ فَإِنْ حَسِبَكَ اللَّهُ هَٰؤُلَاءِ
بِئْسَ مَا تَحْكُمُ بِهِمْ وَيَلْمِزُهُمْ﴾

63. Isuna soo Dumay Quluubtooda, haddaad Bixiso waxa Dhulka ku Sugaan oo Dhan Maadan isu Dunteen Quluub-

﴿وَأَلْفَ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ وَأَنْفَقْتَ مَافِي الْأَرْضِ جَمِيعًا
مَا أَلْقَتْ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ وَالْكَوْنِ اللَّهُ أَلْفَ بَيْنَهُمْ﴾

tooda, Eebaase isu Dumay Dhexdooda Illeen isagaa Adkaade falsan ehe.

إِنَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٦﴾

64. Nabiyow waxaa kugu Filan Eebe Adi iyo inta ku Raacday ee Mu'miniinta ah.

يَأْتِيهَا النَّبِيُّ حَسْبُكَ اللَّهُ وَمَنِ اتَّبَعَكَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٢٧﴾

65. Nabiyow ku boorri mu'miniinta Dagaalka hadday idinka Mid yihiin Labaatan Samra (Adkaysta) Waxay ka adkaan Labo Boqol, Hadday idinka Mid yihiin Boqol waxay ka Adkaan Kun ah kuwa Gaaloobay, Illeen waa Qoomaan wax kasayne.

يَأْتِيهَا النَّبِيُّ حَرَضَ الْمُؤْمِنِينَ عَلَى الْقِتَالِ إِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ عَشْرُونَ صَبِيرُونَ يَغْلِبُوا مِائَتِينَ وَإِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ مِائَةٌ يَغْلِبُوا أَلْفًا مِنَ الَّذِينَ كَفَرُوا بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٢٨﴾

Diinta Islaamku waa Diin Nabad galyo, Isjaceyl, Iskaalmayn, Saas darteed yuu Eebe faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha Yeelee) In hadday Gaaladu u Leexaan oo Doonaan Nabad (Dagaal La'aan Nabiguna u Leexdo, Eebana Talo saarto, kana Digtoonaa, Illeen Eebaa wax Maqla waxna Oge, hadday doonaan inay Khayaamaan oo Dhagraan Nabigana waxaa ku Filan Eebaha ku Xoojiyey Gargaarkiisa iyo Mu'miniinta, Isuna Dumay Quluubta Mu'miniinta, Illeen waxa Dhulka ku sugan oo Dhan haddii la Bixiyo cidina isuma Dumii karto Quluubtoodee, Eebaase isu Dumay, Illeen isagaa Adkaada oo Falsame, Kaafiyana Nabiga iyo Mu'miniintee, Tan kale waa in Mu'miniintu Dagaallamaan Xaqana difaacaan haba ka badnaadeen Gaaladuye, Illeen Muslimiinta waxaa laga rabaa Adkaysi, Rumayn Xaqa, iyo Jahaad Dhab ah, Gaalana way Jabi oo Hallagsami hadday la Dagaallamaan Muslimiintii Dhaba oo Geerida Oggol Eebana ku Xidhan Dhabna u Rumeysan. Al-Anfaal (61-65).

66. Hadda wuu idinka Fududeeyey Eebe wuxuuna ogyahay inaad tabar Yar tihiin, hadday idinka Mid yihiin Boqol Samra (Adkaysta) waxay ka Adkaan Labo Boqol, Hadday idinka Mid yihiin Kunna waxay ka Adkaan Labo Kun Idanka Eebe, Ilaahayna wuxuu la Jiraa kuwa samra.

أَلَنْ خَفَّفَ اللَّهُ عَنْكُمْ وَعَلِمَ أَنَّ فِيكُمْ ضَعْفًا فَإِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ مِائَةٌ صَابِرَةٌ يَغْلِبُوا مِائَتِينَ وَإِنْ يَكُنْ مِنْكُمْ أَلْفٌ يَغْلِبُوا أَلْفِينَ بِإِذْنِ اللَّهِ وَاللَّهُ مَعَ الصَّابِرِينَ ﴿٢٩﴾

67. Kuma habboona Nabi inay u ahaato kuwo la qafaashay intuu kaga Jilciyo Dhulka Dhexdiisa (Gaalada) waxaad Doonaysaan Muuqa Addunyaada Eebana wuxuu dooni Aakhiro, Eebana waa Adkaade Falsan.

مَا كَانَ لِلنَّبِيِّ أَنْ يَكُونَ لَهُ دَأْسٌ فِي حَتَّى يُشْفَى فِي الْأَرْضِ تُرِيدُونَ عَرَصَ الدُّنْيَا وَاللَّهُ يُرِيدُ الْآخِرَةَ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٣٠﴾

68. Hadduusan Jirin Kitaab Eebe oo horreeyey waxaa idin taaban lahaa waxaad qadateen Darteed Cadaab wayn.

لَوْلَا كِتَابٌ مِنَ اللَّهِ سَبَقَ لَمَسَّكُمْ فِيمَا أَنتُمْ تَوَدَّعُونَ عَظِيمٌ ﴿٣١﴾

69. ee Cuna waxaad Qaniimaysataan oo Xalaal Fiicana, kana dhawrsada Eebe, Illeen Ilaahay waa Dhaafe Naxariistee.

فَكُلُوا مِمَّا عَمِلْتُمْ حَرَائِلًا غَلِيظًا وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ
عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٦٩﴾

Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyey in markay soo Degtay Aayadda Caddayn in Labaatan Muslimiina la Dagaallamaan Labo Boqol oo Gaala ah ay ku Cuslaatay Muslimintii, markaas Eebe soo Dejiyey Aayadahan ka Fududayn oo ah in Boqolku la Dagaallamaan Labo Boqol, Kunkuna Labo Kun la dagaallamo, Markay samraan oo adkaystaan Eebaa u gargaari, saasuuna Xaalku ku Sugnaaday, Sina uma bannaana in markaas la cararo ama la Cabsado, markii Maalintii Badar Qaar la Laayey Gaaladii Qaarna la Qafaashay yuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) la Tashaday Asaxaabta sidii la yeeli lahaa Dadkaas, markaasuu Sayid Abuubakar Yidhi: aan Daynno oon la layn, Sayid Cumarna Yidhi ha la laayo, Markii la raacay soo Jeedintii Sayid Abuubakarna waxaa soo degtay Aayadahan oo Canaan ah, iyo inay habboontahay in Eebe la Adeeco, Adduunna loo Xilan, saasna uu ku Xalaaleeyey Qaniimada laga helo Gaalada, waxaana Muslimiinta ku Waajiba Jahaad, Adkaysi iyo Eebe Adeecid. Al-Anfaal (66-69).

70. Nabiyow ku Dheh kuwa la Qafaashay ee Gacmihiinna ku jira hadduu ku Ogyahay Eebe Quluubtiina Khayr wuxuu idin siin mid ka Khayrroon wixii laydinka Qaaday, wuuna idiin Dhaafi, Eebana waa Dhaafe Naxariista.

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ قُلْ لِمَنْ فِي أَيْدِيكُمْ مِنَ الْأَسْرَىٰ إِنَّ
بِعَدَمِ اللَّهِ فِي قُلُوبِكُمْ خَيْرًا مِّمَّا يَتُوبُكُمْ خَيْرًا مِّمَّا
أَخَذْتُمْ مِنْهُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ وَاللَّهُ عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٧٠﴾

71. Hadday Doonaan Khiyaamadaada waxay Khayaameen Eebe mar hore markaasuu idin Makaniyey Eebana waa Oge Falsan.

وَإِنْ يُرِيدُوا خِيَانَتَكَ فَقَدْ خَانُوا اللَّهَ مِنْ قَبْلُ
فَأَمْكَنَ مِنْهُمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٧١﴾

72. Kuwa Rumeeyey ee Hijrooday ee ku Jahaaday Xoolahooda iyo Naftooda Jidka Eebe iyo kuwa Dumay (soo Dhaweeyey) una Gargaaray kuwaasu Qaarkood waa Gargaaraha Qaar, kuwa Rumeeyey oon hijroonnin Gargaarkooda waxba idinkama Saarra intay ka Hijrooni, haddayse idiinku Gargaar warsadaan Diinta korkiinna Gargaar-baa ah, qaar Dhexdiinna Ballan yahay mooyee, Eebana waxaad Falaysaan wuu Arkaa.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَهَجَرُوا وَجْهَهُدُوا يَأْمُرُهُمْ
وَأَنْفُسُهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَالَّذِينَ آوَوْا وَنَصَرُوا أُولَٰئِكَ
بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَلَمْ يهَاجِرُوا
مَا لَكُمْ مِنْ وَلِيَّتِهِمْ مِنْ شَيْءٍ حَتَّىٰ يهَاجِرُوا وَإِنْ
أَسْتَضَرُّوكُمْ فِي الدِّينِ فَعَلَيْكُمْ النَّصْرُ إِلَّا عَلَىٰ
قَوْمِ بَيْنِكُمْ وَبَيْنَهُمْ فَيَسْقِئُ اللَّهُ مِمَّا تَعْمَلُونَ
بَصِيرًا ﴿٧٢﴾

Dagaalkii Badar ee waynaa waxaa lagu Qafaashay Gaalo Badan iyo Dad la soo Qasbay, Ciddii Toosnaata oo ka midana Eebe wuxuu Siin wax ka Khayroon wixii laga qaaday una Dambi Dhaafi, haddayse Nabiga Khayaamaan horay Eebe u Khayaameen markaas Muslimiinta Gacanta u galiyey, Illeen waa wax walba oge Falsane.

Tan kale Ciddii Rumaysay Xaqa oo Hijrootay oo Xoolaheeda iyo Nafteedaba ugu Jahaadday Jidka Eebe, iyo kuwii soo Dhaweeyey una Gargaaray Qaarkood qaarbuu Sokeeye u yahay, kuwaanse saas falin waxba kama dhaxeeyo intay ka falaan, haddayse Gargaar idin warsadaan waa loogu gargaari Cidaan Ballan lala Dhigan. Al-Anfaal (70-72).

73. Kuwa Gaaloobay Qaarkood Waa Sokeeyaha Qaar, haddaydaan saas falinna (Ogaanna) Fidmaa ahaan Dhulka iyo Fasaad wayn.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ ۚ إِن تَقَعُلُوهُ تَكُن فِتْنَةً فِي الْأَرْضِ وَفَسَادٌ كَبِيرٌ ﴿٧٣﴾

74. Kuwa Rumeeyey ee Hijrooday ee ku Jahaaday Jidka Eebe iyo kuwa soo Dhaweeyey una Gargaaray kuwaasu iyagaa Mu'miniinta Dhaba ah, waxayna Mudan Dambi Dhaafid iyo Rizqi Sharafle.


وَالَّذِينَ آمَنُوا وَهَاجَرُوا وَجْهَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَالَّذِينَ آوَأُوا وَانصَرَوْا أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٧٤﴾

75. Kuwa Rumeeya Gadaal oo Hijrooda oo Jahaada la Jirkiinna kuwaasu waa idinka mid, Qaraabadaana Qaarkeed Qaar ka Mudanyahay Xukunka Eebe, Ilaahayna waxkasta waa ogyahay.

وَالَّذِينَ آمَنُوا مِنْ بَعْدُ وَهَاجَرُوا وَجْهَهُمْ وَأَمْعَهُمْ فِئْتَانًا مِنْكُمْ وَأُولُوا الْأَرْحَامِ بَعْضُهُمْ أَوْلَىٰ بِبَعْضٍ فِي كِتَابِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٧٥﴾

Waa in la Ogaado in Muslimiintuna Walaalo yihiin, Gaaladuna isu kaalmaystaan Colnimada Xaqa iyo Diinta Islaamka, Haddii kale waxaa dhici Fidmo iyo Fasaad wayn, Kuwa Xaqa Rumeeyase oo hijrooda kuna Jahaada Jidka Eebe iyo kuwa soo Dhaweeya una Gargaara kuwaasu waa Mu'miniinta Xaqa ah ee Dhabta ah Dambi Dhaafid iyo Wanaagna way Mudan.

Kuwa Dib ka Rumeeya oo Hijrooda oo Jahaada la Jirkiinna waa idinka mid, Qaraabadaase Qaarkeed Qaar ku mudanyahay Kitaabka Eebe, wax kastana Eebaa Og. Waxay Caddeeyeen Aayaduhu Abaalka Wanaagsan ee Mu'miniintu Mudan Akhiro. Al-Anfaal (73-75).



Suurat At-Tawbah



1. Tani waa ka beri ahaasho Alle iyo Rasuulkiisu ay ka beri noqonayaan kuwaad la Ballanteen oo Mushrikiinta (Gaalada) ah.

بَرَاءَةٌ مِنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ إِلَى الَّذِينَ عَاهَدْتُمْ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿١﴾

2. ee socda Dhulka afar bilood ogaadana inaydaan daalinayn Eebe iyo in Eebe uu dulleyn gaalada.

فَيَسْجُودُ فِي الْأَرْضِ أَرْبَعَةَ أَشْهُرٍ وَعَلَّمُوا أَنْتَكُمْ عَذَابَ مُعْجِزِي اللَّهِ وَأَنَّ اللَّهَ مُخْزِي الْكَافِرِينَ ﴿٢﴾

3. waana ogaysiin Eebe ka ahaatay iyo Rasuulkiisa oo Dadka Maalinta Xajka wayn la ogeysiin in Eebe ka bari yahay Gaalada iyo Rasuulkiisu, haddaad Toobadkeentaanna saasaa idiin Khayr-roon, haddaad jeedsataanna ogaada inaydaan Eebe Daalinayn, uguna Bisahaareeya kuwii gaalobay Cadaab daran.

وَأَذَانٌ مِنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ إِلَى النَّاسِ يَوْمَ الْحَجِّ الْأَكْبَرِ أَنَّ اللَّهَ بَرِيءٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ وَرَسُولُهُ فَإِنْ تُبْتُمْ فَهُمْ حُرٌّ لَكُمْ وَإِنْ تَوَلَّيْتُمْ فَأَعْلَمُوا أَنَّكُمْ عَذَابُ مُعْجِزِي اللَّهِ وَسِيرِ الَّذِينَ كَفَرُوا يُعَذِّبُ اللَّهُ النَّاسَ بِالْبُرْءِ ﴿٣﴾

4. Kuwaad ballanteen Mooyee oo gaalada ah markaasna aan idinka Nusqaaminin waxba, idiinkuna kaalmaynin cidna, ee dhammeeya tan iyo ballankooda «Muddadooda», Eebana wuxuu jecelyahay kuwa dhawrsada.

إِلَّا الَّذِينَ عَاهَدْتُمْ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ثُمَّ لَمْ يَنْقُصُوكُمْ شَيْئًا وَلَمْ يُظَاهِرُوا عَلَيْكُمْ أَحَدًا فَأَتِمُوا لِقَابَتِهِمْ إِعْهَدَهُمْ إِلَى مَدَنِهِمْ إِنْ اللَّهُ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ ﴿٤﴾

Suuraddani waxay ka mid tahay suuradaha ugu dambeeyey soo degid, Illeen xaggeeda hore waxay soo degeen markii laga soo noqday Duullaankii Tabuuk, Bisinna laguma bilaabin Suuradda, waxayna caddeyn in Eebe iyo Rasuulkiisu ka bari yihiin gaalo, kuwii ballan lala dhigtayna uu u jiro muddo afar Bilooda, saasaana la ogaysiiyey Maalintii iiddii Carrafo, cid ballan leh oon jabin mooyee, colna ugu kaalmaynin Muslimiinta waxaana la sugi mudadooda, taasina waxay ku tusin sida Islaamku ballanka u dhawro una ilaaliyo iyo inaan Eebe iyo Rasuulkiisa iyo gaalo wanaag dhax oollin. At-Tawbah (1-4).

5. markay faydmaan bilaha xurmada leh ku dila gaalada meeshaad ka heshaan qabtana (qafaasha) Go'doomiya una fadhiista meel gabbasho ah oo

فَإِذَا أَنْسَلَخَ الْأَشْهُرَ الْحُرُمَ فَاقْتُلُوا الْمُشْرِكِينَ حَيْثُ وَجَدْتُمُوهُمْ وَخُذُواهُمْ وَأَحْضِرُوا لَهُمْ وَأَقْعُدُوا

dhan, haddayse toobad keenaan oo-gaanna salaadda, bixiyaanna Sakada u sii daaya jidkooda, Eebe waa dambi dhaafe Naxariistee.

6. mid ka mida gaaladana hadduu magangal idin waydiisto magangaliya intuu ka maqlo hadalka Eebe markaas Gaadhsiiya meeluu Aamin ku yahay, illeen waa qoom aan wax ogayne.

7. siday ugu ahaan gaalada ballan Eebe agtiisa iyo Rasuulkiisa agtiisa kuwaad kula ballanteen Masaajidka Xurmada leh Agtiisa mooyee ee hadday idiin toosnaadaan u toosanaada, Eebe wuxuu jecel yahay kuwa Dhawrsadee.

markay baxaan bilaha xurmada leh waxaa bannaan in la laayo gaalada meel kastoo laga helo oo la qafaasho lana qabto meel kastana loo fadhiisto, haddayse toobad keenaan oo salaadda oogaan oo bixiyaan sakada waxaa loo sii dayn jidkooda, illeen Eebe waa dambi dhaafe naxariiste, haddii cid gaalada ka mid ah nabadgalin warsadaan Muslimiinta ha la nabadgalayo intay ka dhagaystaan hadalka Eebe, markaas la gaadhsiiyo meeshay aaminka ku yihiin illeen waa kuwaan wax ogayn, siduu Nabigu falay (Naxariis iyo nabadgalayo Eebe korkiisa ha yeelee) sanadkii xudaybiyo, iyo marar kale oo sabab u noqotay hanuunkooda, tan kale gaaladu ballan kuma laha Eebe iyo rasuulkiisa agtiisa, kuwii lagula ballamay masaajidka xurmada leh agtiisa mooyee, waana in loo toosnaado intay toosan yihiin, Eebana wuxuu jecelyahay kuwa dhawrsada, Nabiguna saasuu falay Muslimiintuna faleen mana bannaana in ballan la jabiyo. At-Tawbah (5-7).

8. waa sidee hadday idinka adkaadaan ayna idiin dhawrayn Qaraabannimo iyo ballan midna, waxay idinku raalli galin afkooda wayna diidi quluubtoodu, badankooduna waa faasiqiin.

9. waxay ku gataan Aayaadka Alle qiimo yar, waxayna ka leexiyeen jidka Eebe, waxaana xun waxay falayeen.

10. umana dhawraan Mu'min qaraabonimo iyo ballan (midna) kuwaasuna waa uun xadgudbayaal.

11. haddayse toobadkeenaan oo oogaan salaadda bixiyaanna sakada waa walaalihiinna diinta waana u caddaynay aayaadka qoomkii wax garan.

لَهُمْ كَلَّ مَرَصِدًا فَإِن تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا
الزَّكَاةَ فَخَلُّوا سَبِيلَهُمْ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥﴾

وَإِن أَمَدٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ اسْتَجَارَكَ فَأَجِرْهُ حَتَّى
يَسْمَعَ كَلِمَةَ اللَّهِ ثُمَّ أَبْلِغْهُ مَأْمَنَهُ ذَلِكَ
يَأْتِيهِمْ قَوْمٌ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٦﴾

كَيْفَ يَكُونُ لِلْمُشْرِكِينَ عَهْدٌ عِندَ اللَّهِ وَعِندَ
رَسُولِهِ إِلَّا الَّذِينَ عَاهَدْتُمْ عِندَ الْمَسْجِدِ
الْحَرَامِ فَمَا اسْتَقْتُمُوا لَكُمْ فَاسْتَقِيمُوا لَهُمْ
إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ ﴿٧﴾

كَيْفَ وَإِن يَظْهَرُوا عَلَيْكُمْ لَا يَرْقُبُوا فِيكُمْ
إِلَّا وَلَا ذِمَّةً يُرْضُونَكُمْ بِأَفْوَاهِهِمْ وَتَأْبَى
قُلُوبُهُمْ وَأَكْثَرُهُمْ فَاسِقُونَ ﴿٨﴾

اسْتَرُوا بَعَائِتِ اللَّهِ ثَمَنًا قَلِيلًا فَصَدُّوا عَن
سَبِيلِهِ إِنَّهُمْ سَاءَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٩﴾

لَا يَرْقُبُونَ فِي مُؤْمِنٍ إِلَّا وَلَا ذِمَّةً وَأُولَئِكَ هُمُ
الْمُعْتَدُونَ ﴿١٠﴾

فَإِن تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ
فَإِحْوَانُكُمْ فِي الدِّينِ وَنُفِصِلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ
يَعْلَمُونَ ﴿١١﴾

12. haddayse buriyaan dhaartooda ballankoodii ka dib, duraanna diintiinna dila madaxda gaalada waa kuwaan dhaar lahayne inay ka joogaan (Xumaanta).

وَإِنْ نَكَرْتُمْ أَيْمَانَهُمْ مِنْ بَعْدِ عَهْدِهِمْ
وَطَعْنُوا فِي دِينِكُمْ فَقَدْ تَلَوْنَا آيَةَ الْكُفْرِ
إِنَّهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ لَهُمْ لَعْنَةُ اللَّهِ يَسْتَهْوَتُونَ ﴿١٢﴾

Gaaladu ma dhawraan muslimiinta hadday ka tabar roonaadaan ugumana naxariistaan qaraabannimo iyo ballan midna, iyagoo afkana isku dayi inay ku raalli galiyaan muslimiinta, qalbigooduna diidi oo faasiqiina ah, kuna gatay aayaadka Eebe qiimo yar, jidkiisana ka leexiya Dadka, wax xunna fala, cid Mu'minanna aan u dhawrayn qaraabo iyo ballan iyagoo Xadgudbi, haddayse toobadkeenaan oo salaadda oogaan oo sakada Bixiyaan, waa walaalihiinna diinta, aayaadkana wuxuu Eebe u caddeeyey cidii wax garan, haddayse buriyaan dhaartooda ballan kadib duraanna diintiinna waa in la laayo madaxda gaalada dadka fari xumaanta xaqdiidka iyo gaalnimadana ku hagaajin, waa kuwaan ballan iyo dhaar lahayne bal inay xumaanta ka joogaan, saasayna u muuqataa wadada islaamku oon qarsoodi iyo qalqallooc midna ugu jirin, ciddii kula nabaddana la nabad tii diidda xaqa oo burisa ballankana iska celiya kana ditgoonaada. At-Tawbah (8-12).

13. miyeydaan la dagaallamayn qoom buriyey dhaartooda oo hammiyey (doonay) bixinta Rasuulka idinkuna billaabay markii horaba, miyaad ka cabsanaysaan, Eebaa mudan inaad ka cabsataan haddaad Mu'miniin tihiin.

أَلَا تَقْتُلُونَ قَوْمًا نَكَرْتُمْ أَيْمَانَهُمْ وَهَمُّوا
بِإِخْرَاجِ الرَّسُولِ وَهُمْ بَدَّوْكُمْ وَأَوْلَ مَثَرَهُ
أَتَخْشَوْنَهُمْ وَاللَّهُ أَحَقُّ أَنْ تَخْشَوْهُ إِنْ كُنْتُمْ
مُؤْمِنِينَ ﴿١٣﴾

14. la dagaallama, Eebe ha ku cadaabo gacmihiinnee hana dulleeeye hana idinku gargaaree oo bogsiyo laabta qoom Mu'miniina.

فَتِلْوَهُمْ بَعْدَ بَيْعَتِهِمْ بِأَيْدِيكُمْ وَيُخْرِجُهُمْ
وَيَضْرِبُوهُ عَلَيْهِمْ وَيَشْفِ صُدُورَ قَوْمٍ مُؤْمِنِينَ ﴿١٤﴾

15. tegsiyana cadhada quluubtooda, wuxuuna ka toobad aqbalaa Eebe cidduu doono, Eebana waa oge falsan.

وَيَذْهَبَ عَنَّا فَلْيُحَدِّثْهُمْ فَيُؤْتِبُوا اللَّهَ عَلَيَّ مِنَ بِنْسَاءٍ
وَاللَّهُ عَلَيْهِمْ حَكِيمٌ ﴿١٥﴾

16. ma waxaad u malayseen in laydinka tegi isagoon Eebe ogaannin kuwa jahaaday oo idinka mida oon ka yeelanin wax ka soo hadhay Eebe iyo Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta Saaxiib, Eebana waa ogyahay waxaad falaysaan.

أَمْ حَسِبْتُمْ أَنْ تُتْرَكُوا وَلَمَّا يَعْلَمِ اللَّهُ الَّذِينَ جَاهَدُوا
مِنْكُمْ وَلَمْ يَتَّخِذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلَا رَسُولِهِ وَلَا
الْمُؤْمِنِينَ وَلِجَنَّةٍ وَاللَّهُ خَبِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٦﴾

aayaduhu waxay ku adkayn Muslimiinta inay la dagaalamaan gaalada burin ballanka oo ahaa kuwii bixinta rasuulka hammiyey doonayna xumaanna billaabay, wax laga cabsadana ma aha ee ilaahay yaa ka cabsi mudan, waana in kuwaas lala dagaallamo, lana dulleeeyo, Eebana ugu gargaaro Mu'miniinta, quluubtoodana u caafiyo, cadhadana ka tegsiyo, cidduu doonana uu ka aqbaloo Toobada, illeen waa oge falsane. Imtixaan la'aanna Mu'miniinta lagu daynmaayo intay ka muuqato kuwa jahaaday oon gaalo saaxiib ka yeelan intay Eebe, Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta ka leexdaan, Eebase waa ogyahay waxay fali, wuuna ka abaal marin.

Aayaduhu waxay ku uruursadeen in gaalo colka Muslimiinta tahay oyna waajib tahay in la jahaado intay xaqa ka soo horjeedaan lagana dhigannin saaxiib sokeeye iyo gargaare midna, illeen waa cole. At-Tawbah (13-16).

17. uma bannaana gaalada inay cammiraan Masaajidda Eebe iyagoo ku qiri Naftooda gaalnimu kuwaas waxaa buray camalkoodii naartana way ku dhex waari.

مَا كَانَ لِلْمُشْرِكِينَ أَنْ يَعْمُرُوا مَسْجِدَ اللَّهِ شَاهِدِينَ
عَلَىٰ أَنفُسِهِمْ بِالْكُفْرِ أُولَٰئِكَ حَبِطَتْ
أَعْمَالُهُمْ فِي النَّارِ هُمْ خَالِدُونَ ﴿١٧﴾

18. waxaa uun cammira masaajidda Eebe cid rumaysay Eebe iyo maalinta dambe oo salaadda ooga oo bixiya sakada, kana cabsanayn waxaan Eebe ahayn, waxay u dhawyihiin kuwaas inay ka mid noqdaan kuwa hanuunsan.

إِنَّمَا يَعْمُرُ مَسْجِدَ اللَّهِ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ
الْآخِرِ وَأَقَامَ الصَّلَاةَ وَآتَى الزَّكَاةَ وَلَمْ يَحْشَ
إِلَّا اللَّهَ فَسَيُؤْتِكُمْ وَأَنْتُمْ تَسْلِمُونَ ﴿١٨﴾

19. ma waxaad kala mid dhigteen waraabinta xaajiga iyo camiridda masaajidka xurmaysan ruux rumeeyey Eebe iyo maalinta dambe oo ku jahaaday jidka Eebe, kuma sinna Eebe agtiisa, Eebana ma hanuuniyo qoomka daalimiinta ah.

*أَجْعَلْنٰهُم سِقَايَةَ الْحَاجِّ وَعِمَارَةَ الْمَسْجِدِ
الْحَرَامِ كَمَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَجَاهَدَ فِي
سَبِيلِ اللَّهِ لَا يَسْتَوُونَ عِنْدَ اللَّهِ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي
الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴿١٩﴾

20. kuwa rumeeyey (Xaqa) oo hijrooday oo ku jahaaday jidka Eebe xoolahooda iyo naftooda, yaa ku darajo wayn Eebe agtiisa, kuwaasina waa kuwa uun liibaanay.

الَّذِينَ آمَنُوا وَهَاجَرُوا وَجَاهَدُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ
بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ أَعْظَمُ دَرَجَةً عِنْدَ اللَّهِ وَأُولَٰئِكَ
هُمُ الْقَائِمُونَ ﴿٢٠﴾

21. wuxuu ugu bishaarayn Eebahood naxariis xaggiisa ah, raalli ahaansho iyo jannooyin oy ku mudan dhexdeeda nicmo nagaadi ah «Joogto».

يَبْسُرُهُمْ رَبُّهُمْ بِرَحْمَةٍ مِنْهُ وَرِضْوَانٍ وَجَّهَتْ
لَهُمْ فِيهَا نِعَايَهُمْ مُّقِيمٌ ﴿٢١﴾

22. iyagoo ku waari dhexdeeda wali-good Eebe agtiisaana Ajir wayn yahay.

خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا إِنْ لَمْ يَنْتَهِ عَندهُ أَجْرٌ
عَظِيمٌ ﴿٢٢﴾

gaalo xaq uma leh inay cammiraan oo dhisaan ama ku nagaadaan masaajidda Eebe illeen waaba gaalee, camalkooduna wuu buri, naarna way ku waari, waxaase cammira masaajidda Eebe mu'iniinta hanuunsan, isku midna ma aha cid xaqa dhammaan rumaysay iyo gaaladii Makaad ee waraabin jiray Xujaajta, masaajidkana cammiri jiray, waxbase uma tarin, waxaase liibaani oo janno ku waari kuwa rumeeya xaqa, oo hijrooday oo jahaada, waana kaas jidka xaqa ah ee toosan ee wax tara qiimana leh. waxaa jirtay in dad ku faaneen inay cammiri masaajidka xurmaysan iyo waraabinta xujaajta iyo wax la mida, markaasaa waxaa soo dagay aayaddan caddeyn mu'minka dhabta ah ee Liibaanay.

At-Tawbah (17-22).

23. kuwa (xaqa) rumeeyow ha ka yeelannina Aabayaalkiin iyo walaalihiin sokeeye hadday ka jeclaadaan gaalnimada iimaanka, ciddiise ka sokeeye yeelata oo idinka mida kuwaasu iyaga umbaa daalimiina.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا يَتَّخِذُوا ءَابَاءَكُمْ
وَءِخْوَانَكُمْ ءَوْلِيَاءَ إِنِ اسْتَحَبُّوا ءَلَّكُمْ فَرَعَلَى
الْإِيمَنِ وَمَنْ يَقُولْهُم مِّنْكُمْ فَأُولَئِكَ هُم
الظَّالِمُونَ ﴿١٣﴾

24. waxaad dhahdaa haddaad aabayaalkiin, caruurtiinna, wallalihiin, haweenkiinna, qaraabadiinna, xoolo aad kasbateen, ganacsi aad ka cabsanaysaan inuu baaro iyo guryo aad ka raalli tihiin ka jeceshihiin Ilaahay, rasuulkiisa iyo jahaad jidkiisa, suga inta Eebe ka keeni amarkiisa, Eebana ma hanuuniyo qoomka faasiqiinta ah.

قُلْ إِن كَانِ ءَابَاؤُكُمْ وَءَبْنَاؤُكُمْ
وَءِخْوَانُكُمْ وَأَزْوَاجُكُمْ وَعَشِيرَتُكُمْ وَأَمْوَالٌ
أَقْرَبَتْكُمْ وَبَنَاتٌ تُنْحَوْنَ كَسَادَهَا
وَمَسَكِنٌ تَرْضَوْنَهَا أَحَبَّ إِلَيْكُمْ مِنَ اللَّهِ
وَرَسُولِهِ وَجِهَادٍ فِي سَبِيلِهِ فَتَرْتَمَوْنَ أَعْيَى
يَأْتِ اللَّهُ بِأَمْرِهِ ءَلَّهِ لَآ يَهْدَى الْقَوْمُ
الْفَاسِقِينَ ﴿١٤﴾

25. wuxuu idiinku gargaaray Eebe meelo badan, iyo maalintii xunayn markay idin cajabisay badnidiinnii oona waxba idiin tarin dhulkuna idinku cidhiidhyamay isagoo waasaca markaas aad jeedsateen idinkoo carari.

لَقَدْ نَصَرَكُمُ اللَّهُ فِي مَوَاطِنَ كَثِيرَةٍ وَيَوْمَ
حُدَيْبٍ إِذْ أَعْبَجْتُمْ كَفَرْتُمْ فَلَمْ تُغْنِ
عَنكُمْ سَيِّئَاتِكُمْ وَصِفَاتِ عَلَيْكُمْ ءَلْأَرْضِ بِمَا
رَحِمْتُمْ وَلَقَدْ مُدِرْتُمْ ﴿١٥﴾

26. markaas Eebe ku soo dajiyey xasilkiisii Rasuulkiisii iyo Mu'miniintii kuna soo dejiyey junuud aydaan arkayn, uuna cadaabay kuwii gaalobay, taasina waa abaalka gaalada.

كُمُ أَنْزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَى رَسُولِهِ وَعَلَى
الْمُؤْمِنِينَ وَأَنْزَلَ جُنُودًا لَّمْ تَرَوْهَا وَعَذَّبَ
الَّذِينَ كَفَرُوا وَذَلِكَ جَزَاءُ الْكَافِرِينَ ﴿١٦﴾

27. markaas Eebe ka toobad aqbaloo intaas ka dib cidduu doono, Eebana waa dambi dhaafe naxariista.

كُمُ يَتُوبُ إِلَى اللَّهِ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ عَلَى مَنْ
يَشَاءُ ءَللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٧﴾

Eebe wuxuu ku reebi aayadaha hore in qaraabo laga yeesho cid gaalnimo xaqa ka dooratay ama aabbo ha ahaato ama walaal iyo wax la mida, Ciddiise qaraabadiisa, xoolihiisa, ganacsiigiisa iyo guryihiisa ka doorta xaqa iyo jahaadka ha sugo balaayo iyo ciqaab, illeen faasiqbuu noqdaya. Waxaana waajibta in Eebe, diinta islaamka ah iyo rasuulka Muxamada, loo jeclaado si daran, wax kastana laga jeclaado sida xadiith ku sugnaatay. aayadaha kale waxay caddayn in muslimiinta wax badan Eebe u gargaaray, gaar ahaan Maalintii xunayn oo muslimiintu la yaabeen badnidooda markaas ay cararen Nabiga iyo in la jirtay mooyee, markaas Eebe xoojiyey si ficnana u dagaallameen gaaladiina jabiyeey, cidduu doonana ka toobad aqbalay, waana dagaalkii xuneyn ee maka iyo dhaa'if dhexdooda lala galay qoomkii Hawaasin, tassina waxay ku tusi inayna badni waxba tarayn mar haddaan Eebe gargaarkiiisu jirin laguna xidhnayn, illeen maalintii badar oo la yaraana waakii markiiba gaaladii badnayd la jabiyeey, maalintii xuneynna ee la badnaana markii hore la jabay markaas Eebe u gargaaray. At-Tawbah (23-27).

28. kuwa xaqa rumeeyow mushrikiintu (Gaalada) waa nijaas ee yeyna masaa-jidka xurmaysan u dhawaannin sanad-

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِنَّمَا الْمُشْرِكُونَ نَجَسٌ فَلَا
يَقْرَبُوا الْمَسْجِدَ الْحَرَامَ بَعْدَ عَمَلِهِمْ هَذَا

kan ka dib, haddaad ka cabsataan saboolnimana wuxuu idinku hodmin Eebe fadligiisa hadduu doono, illeen waa oge falsane.

29. la dagaallama kuwaan rumeyn Eebe iyo maalinta aakhiro oon xaaraan yeelayn wuxuu reebay Eebe iyo Rasuulkiisu ka diin dhiganayn diinta xaqa ah (islaamka) oo ah kuwa ehelu kitaabka ah yuhuud iyo nasaarada intay ka dhiibaan jisyada (iyagoo gacantooda ku dhiibaaya) iyaguna dullaysanyihiin.

30. waxay dhaheen yuhuud cusayr waa wiil Eebe, nasaarana waxay tidhi masiix (ciise) waa wiil Eebe, kaasina waa hadalkoodii oy afka ka sheegeen, waxay shabbahaan kuwii horey u gaalobay hadalkoodii, Eebe hallaayo ee xaggee loo leexin.

31. waxay ka yeesheen culimadoodii iyo suufiyadoodii Eebayaal ilaahay ka sokow iyo ciise ibnu maryama, waxaan cibaadada ilaahay kali ah ahayna lama farin, Ku xaq lugu caabudo oon Allaah ahyan ma jiro, waana ka nasahanyahay waxay la wadaajin.

Gaaladu waa nijaas mana bannaana inay masaajidda galaan una dhawaadan, waana in lala dagaallamo kuwa kitaabka sheegan intay xoolo jisya ah ay bixiyaan muslimiintana siiyaan dhawriddooda darteed, illeen waxay ka leexdeen diintii islaamka ee xaqa ahayde kamana joogaan waxa Eebe iyo rasuulkiisu reeben, waana in kuwaas la xukumo lana ilaaliyo, kibir iyo isla waynina ayan kula noolaannin Muslimiinta, aayadaha kale yuhuuddu waxay cusayr ku sheegtay wiil Eebe, nasaarana waxay ciise ku sheegeen wiil Eebe, waana hadalkii gaaladii ka horaysay oo kale, meel daran yaana loo leexiyey, waxayna Eebe ka yeesheen wadaaddadoodii iyo nabi ciise iyadoo cibaadada Eebe kaliya la faray, cadiyi binu xaatim yaa ku yidhi: maannaan caabudi jirin culimaada, markaasuu yidhi Nabigu waxay jideyaan (oo ah xaaraan la xalaaleeyo, xalaal xaaraan laga dhigo) sow kumaydaan dhaqmayn, wuxuuna yidhi: haa, markaasuu yidhi wataas cibaadadu. sheekh ibnu taymiya wuxuu sheegay inay gaaloobayaan qoladii sax u aragta waxa lagu beddelay sharciga iyagoo og in sharciga la khilaafay. At-Tawbah (28-31).

32. waxay dooni gaaladu inay ku damiyaan Nuurka Eebe afkooda, Eebana wuu diidi dhamaystirka nuurka moyee haba naceen gaaladuye.

33. Eebe waa kan ku diray rasuulkiisa

وَأَنْ خِفْتُمْ عَيْبَةَ فَتَوْفٍ يُغْنِيكُمْ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ إِنَّ شَاءَ اللَّهُ عَلَيْهِ حَكِيمٌ ﴿٢٨﴾

فَتَلَاؤُوا الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَلَا بِالْيَوْمِ
الْآخِرِ وَلَا يُحَرِّمُونَ مَا حَرَّمَ اللَّهُ
وَرَسُولُهُ وَلَا يَدِينُونَ دِينَ الْحَقِّ مِنَ
الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ حَتَّى يُعْطُوا الْجِزْيَةَ
عَنْ يَدٍ وَهُمْ صَاغِرُونَ ﴿٢٩﴾

وَقَالَتِ الْيَهُودُ عُرْيُونَ ابْنُ اللَّهِ وَقَالَتِ
النَّصَارَى الْمَسِيحُ ابْنُ اللَّهِ ذَلِكَ قَوْلُهُمْ
بِأَفْوَاهِهِمْ يُضَاهِئُونَ قَوْلَ الَّذِينَ كَفَرُوا
مِنْ قَبْلُ قَتَلْتَهُمُ اللَّهُ أَذْنُ يُؤْفَكُونَ ﴿٣٠﴾

أَتَّخَذُوا أَحْبَابَهُمْ وَرُءُسَهُمْ أَرْبَابًا بَيْنَ
ذَوِي اللَّهِ وَالْمَسِيحِ ابْنِ مَرْيَمَ وَمَا
أُمْرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا إِلَهًا وَاحِدًا
لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ سُبْحَانَهُ عَمَّا
يُشْرِكُونَ ﴿٣١﴾

يُرِيدُونَ أَنْ يُطْفِئُوا نُورَ اللَّهِ بِأَفْوَاهِهِمْ وَيَأْبَى
اللَّهُ إِلَّا أَنْ يُبَيِّنَ نُورَهُ وَلَوْ كَرِهَ الْكَافِرُونَ ﴿٣٢﴾

هُوَ الَّذِي أَرْسَلَ رَسُولَهُ بِالْهُدَى وَدِينِ

hanuun iyo diin xaqa inuu ka kor mariyo diimaha dhammaan haba naceen gaaladuye.

34. kuwa xaqa rumeeyow wax badan oo ka mida axbaarta (culimada yuhuud) iyo ruhbaantu (culimada Nasaarada) waxay ku cunaan xoolaha dadka xaq darro, waxayna ka celiyaan (dadka xaqa), kuwa kaydsada dahabka iyo fiddada oon ku bixinayn jidka Eebe ugu bishaaree cadaab daran.

35. maalinta Xoolahaas lagu Shidi Naarta jahannamo ay ku guban wajiyadoodu iyo dhinacyadoodu iyo dhabarkoodu, oo lagu odhan: kani waa waxaad u kaydsanayseen Naftiinna ee dhadhamiya waxaad kaydsanayseen ciqaabtiisa.

Culimada xun waa balaayo dadka ku dhex jirta sida culimadii yuhuud iyo nasaara oo been iyo xaqadarro ku cunayey xoolaha dadka, ciddii sidooda fashana wuxuu qaaday jidkoodii, tan kale ciddii Eebe xoola siiyey oon xaqa ku bixinnin ee kulmiya uun oo uruuriya wuxuu mudan in xoolihii lagu gubo lagagana shido meel kasta isagoo lagu dhihi dhadhami waxaad kaydsatay ciqaabtiisa, xoolahaan sakada iyo xaqa Eebe laga bixinninna waa kayd naareed, aayadaha horena waxay caddeyn in gaaladu dooni inay xaqa iyo nuurka Eebe damiyaan kuna qariyaan xumaan iyo baadil, Eebaase diray rasuulka oo hanuun wata iyo diinta islaamka ee xaqa ah, Eebaana dhamaystiri oo diimaha ka kormarin haba naceen gaaladuye.

Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: diintu waxay gaadhi meeshey habeen iyo maalin joogaan, waxayna gali Guri kasto. Taasina waa bishaaro caddeyn caalaminnimada diinta islaamka iyo say u faafi. At-Tawbah (32-35).

36. tirada bilaha Eebe agtiisa waa Labiyo toban kitaabka Eebe dhexdiisa taniyo maalintuu abuuray samooyinka iyo dhulka, waxaana ka mid ah afar xurmo (gaara) leh waana taas diinta toosan ee ha dulmiyina dhexdooda naftiinna, lana dagaallama gaallada dhammaantiin, siday idiinla dagaalamayaan dhammaan, ogaadana in Eebe la jiro kuwa dhawrsada.

37. Dib u dhigidda (bilo) waa uun badsasho gaalnimo laguna baadiyeeyo kuwa gaaloobay, waxay banneeyaan

الْحَقِّ لِيُظْهِرَهُ عَنِ الَّذِينَ كُفِرُوا بِهِمْ وَالَّذِينَ كَفَرُوا
الْمُشْرِكُونَ ﴿٣٢﴾

* يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّ كَثِيرًا مِّنَ
الْأَحْبَارِ وَالرُّهْبَانِ لَيَأْكُونُ أَمْوَالَ النَّاسِ
بِالْبَاطِلِ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ اللَّهِ وَالَّذِينَ
يَكْفُرُونَ أَزْوَاجًا وَآلِهَةً وَالْقُرْبَانَ
يُضْفَرُونَ فِيهَا وَاللَّهُ قَبِيرٌ هُمْ بِعَذَابِ
الْآلِيمِ ﴿٣٣﴾

يَوْمَ يُحْمَى عَلَيْهَا فِي نَارِ جَهَنَّمَ فَتُكْوَى بِهَا
جِبَاهُهُمْ وَجُنُوبُهُمْ وظُهُورُهُمْ هَذَا مَا
كَفَرْتُمْ لَا تَنْفِسُ كُفْرًا فَمَا لَكُمْ
تَكْفُرُونَ ﴿٣٤﴾

إِنَّ عِدَّةَ الشُّهُورِ عِنْدَ اللَّهِ اثْنَا عَشَرَ شَهْرًا فِي
كِتَابِ اللَّهِ يَوْمَ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ مِنْهَا
أَرْبَعَةٌ حُرُمٌ ذَلِكَ الَّذِينَ كَفَرُوا فَلَا تَظْلِمُوا
فِيهِمْ أَنفُسَكُمْ وَقَاتِلُوا الْمُشْرِكِينَ
كَأَنَّهُمْ كَمَا بَقِلْتُمْ كَافَّةً وَاعْلَمُوا
أَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُتَّقِينَ ﴿٣٥﴾

إِنَّمَا النَّبِيُّ زِيَادَةٌ فِي الْكُفْرِ يُضَلُّ
بِهِ الَّذِينَ كَفَرُوا يُحْلِقُونَ رُءُوسَهُمْ وَيُجَمِّعُونَ

sanad waxayna reebaan mid inay waa-faqaan tirada Eebe reebay oyna banneeyaan wax Eebe reebay, waxaa loo qurxiyey camalkoodii xumaa, Eebana ma hanuuniyo qoomka gaalada ah.

عَامًا يُوَاطِّئُوا عِدَّةَ مَا حَرَّمَ اللَّهُ فَيُحِلُّوا
مَا حَرَّمَ اللَّهُ زَيِّنَاتٍ لَهُنَّ سُوءٌ أَعْيُنُهُنَّ وَاللَّهُ
لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ ﴿٣٧﴾

Waxaa jirtay in gaaladu bilaha sanadka say rabaan u qaybin jireen oo mar soo hormarin jireen marna dib u dhigi jireen markaasaa Eebe ku caddeeyey aayadda in Biluhu yihiin Labiyo toban, afar si gaar ah loo dhawrana ka midyihiin waana: Sidataal, Arafo, saka, iyo Rajab oyna xuntahay in lays dulmiyo, tan kale waa in gaalada dhammaan lala dagaallamo siday iyaba dhammaan ula dagaalami muslimiinta, Eebana wxuu la jiraa muslimiinta dhawrsada ee dhabta ah, in kastoo dulmigu goor walba xunyahay haddana bilahaas waa ka sii daranyahy, saas darteed dib u dhigga bil ama horumarinteedu waa uun kordhisasho gaalnimo, waxaana halkaas ka muuqda in xalaal tahay wuxuu Eebe banneeyey, xaaraanna tahay wuxuu Eebe reebay, xaaranna yahay wuxuu Rasuulku reebo ciddii wax Eebe reebay bannaysa ama wax Eebe banneeyey reebta waa mid ilaahay is bar bardhigtay oo dhuntay xaqana ka leexatay. At-Tawbah (36-37).

38. kuwa xaqa rumeeyow maxaad leedihiin oo marka laydin dhaho ku baxa jidka Eebe aad ugu cuslaataan dhulka, ma waxaad ku raalli noqotaan nolosha adduun aakhiro ka sokow, nolosha adduunyo marka aakharo loo dayo waa uun raaxo yar.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا مَا لَكُمْ إِذْ قِيلَ
لَكُمْ أَنْفِرُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَنْ أَقْلْتُمْ إِلَى
الْأَرْضِ أَنْضِبْتُمْ بِالْحَيَاةِ الدُّنْيَا مِنَ
الْآخِرَةِ فَمَا مَتَّعَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا فِي
الْآخِرَةِ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٣٨﴾

39. haddaydaan bixin wuxuu Eebe idin cadaabi cadaab daran, wuxuuna idinku badali qoom aan idinka ahayn, waxna kama dhibaysaan Eebe, Alle wax kasta waa karaa.

إِلَّا تَنْفِرُوا وَعَدَبْتُكُمْ عَذَابًا أَلِيمًا وَمَسْتَبَدَّلَ
قَوْمًا غَيْرَكُمْ وَلَا تَضُرُّهُ شَيْئًا وَاللَّهُ عَلَى
كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٣٩﴾

40. haddaydaan u gargaarin Nabiga waxaa u gargaaray Eebe markay bi-xiyeen kuwii gaaloobay isagoo labo midkooda markay godka ku jireen markuu ku lahaa saaxiibkiis ha walba-haarin Eebaa inala jiree, oo Eebe ku dajiyey xasilkiisa kuna xoojiyey Junuud aydaan arkayn kana yeelay kalimadda kuwa gaaloobay tan hoosaysa, kalimadda Ilaahayna waa tan sarreysa, Eebana waa adkaade falsan.

إِلَّا تَتَضَرَّوهُ فَقَدْ نَصَرَهُ اللَّهُ إِذْ أَخْرَجَهُ
الَّذِينَ كَفَرُوا ثَانِيًا أَتَيْنِينَ إِذْ هَمَّ بِالنَّارِ
إِذْ يَقُولُ لِصَاحِبِهِ لَا تَخْرَجْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا
فَأَنْزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَيْهِ وَأَيَّدَهُ بِجُنُودٍ
لَمْ تَرَوْهَا وَجَعَلَ كَلِمَةَ الَّذِينَ كَفَرُوا
السُّفْلَى وَكَلِمَةَ اللَّهِ هِيَ الْعُلْيَا وَاللَّهُ
عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٤٠﴾

Jahaadku waa waajib mana habboona in marka jahaadku joogo la dib maro oon la bixin, lana doorto nolosha iyo raaxada adduunka, raaxada adduunse waa wax yar oo dhammaan, haddaan jahaadka loo bixinna Eebe wuu cadaabi isagoo ciqaab adduun u soo dadajinaya, kuna badali qoom ka soo hadhay, waxna Eebe kama dhimaan, Eebana isagaa awood leh.

Hadday dadku u gargaari waayaan Nabiga iyo diinta Eebe, ilaahay waa kuu u gargaaray markay gaaladii ka bixiyeen maka oo uu godka galay isaga iyo saaxiibkii Abuubakar kuna yidhi: ha walbahaarin Eebaa inala jiree, Ilaahayna xasil ku soo dajiyey kalimadii gaaladana hoos ka yeelay, kalimadii Eebe ee xaqa ahna koryeelay, illeen Eebaa adkaada oo falsan, waana taas dhibaataada loo soo maray diinta islaamka, waxaa sugnaaday in markuu Sayid Abuubakar ku yidhi Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) hadduu midkood dayo gondihiisa wuu ina arki lahaa, uu ku yidhi: maxaad u malayn labo Alle saddaxeyo. Eebaana wax lagu tiirsada ah lana rumecyoo, Diintiisana loo dagaallamo. At-Tawbah (38-40).

41. Baxa idinkoo fudud iyo idinkoo culus kuna jahaada xoolihiinna iyo naftiinna jidka Eebe, saasaana idiin khayrroon haddaad wax ogtihiin.

أَنْفِرُوا خِفَافًا وَثِقَالًا وَجَاهِدُوا بِأَمْوَالِكُمْ
وَأَنْفُسِكُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ذَلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِنْ
كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٤١﴾

42. hadduu jiro muuqaal adduunyo oo dhaw iyo socdaal gaaban way ku raaci lahaayeen waxaase ku fogaaday socdaalkii, waxayna ku dhaaran Eebe haddaannu kari waan idinla bixi lahayn, waxayna halaagi naftooda Eebna waa ogyahay inay been sheegi.

لَوْ كَانَ عَرَضًا قَرِيبًا وَسَفَرًا قَاصِدًا
لَاتَّبَعُوكُمْ وَلَكِنْ بَعَدَتْ عَلَيْهِمُ السُّفْهَاءُ
وَسَيِّئُ الْخَلْفَاءُ بِاللَّهِ لَوِ اسْتَطَعْنَا لَخَرَجْنَا
مَعَكُمْ يُهْلِكُونَ أَنْفُسَهُمْ وَاللَّهُ يَعْلَمُ إِنَّهُمْ
لَكَاذِبُونَ ﴿٤٢﴾

43. Eebe ha ku cafiyee maxaad u idantay intay kaaga caddaato kuwa runta sheegi ood ka ogaato Beenaalayaasha.

عَفَا اللَّهُ عَنْكَ لِمَ أَذِنَتْ لَهُمْ حَتَّى يَتَّبِعَنَّ لَكَ
الَّذِينَ صَدَقُوا وَقَالَهُ الْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٣﴾

44. kaama idin waydiistaan kuwa rumecyey Eebe iyo maalinta dambe inay ku jahaadaan xoolahooda iyo naftooda, Eebana waa ogyahay kuwa dhawrsada.

لَا يَسْتَنْدِئُكَ الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ
أَنْ يُجَاهِدُوا بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ
بِالْمُتَّقِينَ ﴿٤٤﴾

45. waxaase ku idin waydiin kuwaan rumaynin Eebe iyo maalinta dambe, ayna shakiday quluubtoodu, waxayna ku noqnoqon (ku wareersanyihiin) shakigooda.

إِنَّمَا يَسْتَنْدِئُكَ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ
الْآخِرِ وَأَزَّاتَابَتْ قُلُوبُهُمْ فَهُمْ فِي رَيْبِهِمْ
يَتَرَدَّدُونَ ﴿٤٥﴾

Duullimaadkii waynaa ee tabuuk yuu Eebe faray muslimiinta inay la baxaan nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxaana loo baxay xagga shaam oo gaaladii Ruum, waxayna ahayd arrin adag oo lagu kala baxay, oo munaafiqiintii soocmeen, haddii qanimo dhaw la heli ama

socdaalku gaabanyahay way bixi lahaayeen, waxaase dheer jidka, waxayna ku dhaaran haddaan karro waan kula jiri lahayn, iyagoo been sheegi oo naftooda halaagi markuu nabigu qaar ka mid ah u idmay inay hadhaan yuu Eebe ku yidhi nabiga: Eebe ha ku saamaxo ee maxaad u fasaxday intay dadku dhab ugu kala caddaan, muslimiinta dhabta ahse ma idin warsadaan inay jahaadaan iyo in kale, waxaase idin warsada kuwaan Eebe iyo aakhiro rumaynin oo shakiga la wareersan, aayaduhuna waxay caddeyn siday waajib u tahay inay u wada jiraan jahaadka una kala hadhin, si loo daafaco diinta islaamka iyo dhulka islaamka, muslimiintuna markay ka tageen jahaadkii xaqa ahaa nafna jecleysteen wakaas la qaybsaday oo la qabsaday dhulkoodii, wax sharaftoodii u soccelin oo jahaad dhab ah ahayna ma jiro ee cid maqli ma jirtaa? At-Tawbah (41-45).

46. hadday doonaan bixid waxay u darban lahaayeen qalab, wuxuuse nacay Eebe Bixiddooda, wuuna dib mariyey, waxaana lagu yidhi «gaaladii»: la fadhiista kuwa fadhiya.

﴿وَلَوْ أَنزَلْنَا الْحُرُوجَ لَأَعَدُّوا لَهُ عُدَّةً وَلَكِنْ كَرِهَ اللَّهُ نِيَعَانَهُمْ فَتَضَاهَمَرُوا وَقِيلَ اقْعُدُوا مَعَ الْقَاعِدِينَ ﴿٤٦﴾﴾

47. Hadday baxaan dhexdiinna waxaan xumaan ahayn idiinma kordhiyaan, waxayna u dagdagi lahaayeen fasaadinta dhexdiinna iyagoo idinla dooni fidmo, waxaana idin ku jira kuwo idiin dhagaysan, Eebana waa ogyahay daaliimiinta.

﴿لَوْحَرِّجُوا فِيكُمْ مَرَادُوا كُمْ إِلاَّ خَبَالًا وَلَا وُضِعُوا لِلدِّينِ إِلاَّ سِنًا وَمَا كَفَرْتُمْ بِأَعْيُنِنَا إِنَّمَا تَجْعَلُونَ لِكُلِّ أُمَّةٍ سَنًا وَعُوقِبَ إِلَيْنَا أَلْوَامًا وَمَا تَدْرِي لَئِن لَّمْ يَظْهَرِ عَلَيْكُمْ إِلاَّ السَّيِّئَاتُ مِنَّمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٧﴾﴾

48. waxay idinla dooneen fidno mar hore waxayna kuu gagadiyeen umuuraha intuu ka yimaado xaqu oo ka muuqdo amarka Eebe (xaqa) iyagoo nici.

﴿لَقَدْ آتَيْنَا الْفِتْنَةَ مِن قَبْلُ وَقَلَّبُوا لَكَ الْأُمُورَ حَتَّى جَاءَ الْحَقُّ وَظَهَرَ أَمْرُ اللَّهِ وَهُمْ كَارِهُونَ ﴿٤٨﴾﴾

49. waxaa ka mid ah kuwo dhihi i fasax hana i fidneyn waxayse ku dhaceen fidno, jahannamana way koobtay gaalada.

﴿وَمِنْهُمْ مَن يَقُولُ آمَنَّا بِاللَّهِ لَئِن لَّمْ يَؤْتِنَا رَبُّنَا فَذَرْهُمْ كَمَا هُمْ كَافِرِينَ ﴿٤٩﴾﴾

munaafiqiinta iyo diin laawayashu waxba uma taraan muslimiinta, wayna u raacaan dagaalka wax faa'iido ahna kuma jirto, illeen hadday runsheegi way u darban lahaayeen jahaadke, Eebaase nacay bixiddooda ee ha fadhiyeen sida kuwa fadhiya, hadday baxaan waxay ku abuuri war iyo xumaan muslimiinta dhexdeeda ah iyo fidno iyo balaayo ay la dooni muslimiinta, waxaana ku jira muslimiinta kuwo maqli warka munaafiqiinta, Eeese waa ogyahay daaliimiinta, horaybay u damceen fidno iyo qasba, uguna gadgadiyeen xaalka nabiga iyo muslimiinta dhibkooda intuu ka muuqdo xaqu iyo amarka Eebe iyagoo neceb, waxaase ka mida kuwo dhihi i fasax Nabiyo, hana igu fidneyn bixidda, waxayse ku dhaceen fidnadii iyo balaayadii, jahannamana waxay koobi gaalada. halkaasna waxaa ka muuqda u darbashada jahaadka, ka digtoonida munaafiqiinta iyo war xumayaasha xumaanta la jecel muslimiinta, in Eebe muujin xaqa oo koryeel markay muslimiintu gartaan wanaagga kuna socdaan, waana inaan laga cudurdaar warsanin jahaadka ee waa in la muujiyaa niyad sami, khayr jacayl, daafaca islaamka iyo doonidda wanaagga iyo sharafta Eebe agtiisa ah, isagood talasaarani adkaysi iyo shaqana badini. At-Tawbah (46-49).

50. hadduu wanaag ku soo gaadho wuu walbahaarinayaa Munaafiqiinta, hadday ku hesho dhibaataana waxay dhahayaan waan ka dadaalnay raaciddiisa, mar hore, wayna jeedsadaan iyagoo faraxsan.

إِنْ نُصِبَتْكَ حَسَنَةً سَوَّاهُمْ وَإِنْ نُصِبَتْكَ مُصِيبَةً يَقُولُوا قَدْ أَخَذْنَا أَمْرًا مِنْ قَبْلُ وَتَوَلَّوْا وَهُمْ قَرِيبُونَ ﴿٥٠﴾

51. waxaad dhahdaa naguma dhaco wax Eebe noo qoray mooyee, isagaa gargaarhannaga ah ee Ilaahay uun ha tala Saarteen Mu'miniintu.

قُلْ لَنْ يُصِيبَنَا إِلَّا مَا كَتَبَ اللَّهُ لَنَا هُوَ مَوْلَانَا وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴿٥١﴾

52. waxaad dhahdaa ma waxaad nala sugaysaan waxaan labada wanaag midkood ahayn (Guul ama shahaado) annaguna waxaan idin la sugaynaa inuu Eebe idinku asiibo (ciqaabo) cadaab agtiisa ah ama gacmahannaga, ee suga annaguna waan idin la sugaynaaye.

قُلْ هَلْ تَرَوْحُونَ بِئَا إِلَآ أَحَدَى الْحَسَنَاتِ وَتَعْنُونَ نَرَى بَعْضُكُمْ أَن يُصِيبَكُمْ اللَّهُ بِعَذَابٍ مِنْ عِنْدِهِ أَوْ يَأْتِيَدِيَاتٍ فَتَرَوْحُونَ إِنَّمَا مَعَكُمْ مُتَرَيِّصُونَ ﴿٥٢﴾

53. waxaad dhahdaa Bixiya wax ama ogolaansho ama qasab marnaba laydinkama aqbalee, illeen waxaad tihiin qoom faasiqiina.

قُلْ إِنْفِرُوا طَوْعًا أَوْ كَرْهًا لَنْ يَقْبَلَ مِنْكُمْ إِذْ كُمْ كُنتُمْ قَوْمًا فَاسِقِينَ ﴿٥٣﴾

54. wax u diiday in la aqbalo bixintooda oon ka gaaloowgooda Eebe iyo Rasuulkiisa ahayn majiro, mana yimaaddaan salaadda iyagoo wahsan mooyee, mana bixiyaan iyagoo neceb mooyee.

وَمَا مَنَعَهُمْ أَنْ تُقْبَلَ مِنْهُمْ نَفَقَتُهُمْ إِلَّا أَنَّهُمْ كَفَرُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَلَا يَأْتُونَ الصَّلَاةَ إِلَّا وَهُمْ كَسَالَى وَلَا يُنْفِقُونَ إِلَّا وَهُمْ كَارِهِونَ ﴿٥٤﴾

Munaafiqiinta waxaa ka mid ah kuwo nabiga fasax waydiisan inay dagaalka ka hadhaan iyagoo sheegi inay fidmoobi hadday baxaan, waxayse dhab ugu dhaceen fidno, Naarta Jahannamana way koobi gaalo, hadday muslimiintu khayr helaanna way ka naxaan, hadday dhibaato ku timaadana waxay sheegaan inay dadaaleen waana farxaan, waxaan Eebe qorinse muslimiinta kuma dhaco, isagaana gargaara ah muslimiintu ay talasaartaan, Muslimiintuna waxay heli guul ama waxay ku dhiman shahaadannimo, gaalana ha sugto ciqaab Eebe ama jab ku gaadha gacmaha muslimiinta, waxay bixiyaanna lagama aqbalo illeen waa faasiqiine, waxayna ka gaaloobeen Eebe iyo rasuulkiisa, salaaddana iyagoo wahsanayey yimaaddaan, waxayna wax bixiyaan iyagoo neceb, illeen waa munaafiqiine. At-Tawbah (50-54).

55. yeyna ku yaab galinnin xoolahoodu iyo caruurtoodu, wuxuu uun dooni Eebe inuu ku ciqaabo nolosha adduun

قَلَّا نَعْبُدُكَ أَمْوَالَهُمْ وَلَا أَوْلَادَهُمْ إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيُعَذِّبَهُمْ بِهَا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَتَرْهَقَ أَنْفُسُهُمْ

oy baxdo naftoodu iyagoo gaala ah.

56. waxay ku dhaaran Eebe inay idinla jiraan idinlamana jiraan, waase qoom cabsan.

57. hadday helayaan meel ay magan galaan ama godad (buuro) ama meel ay galaan way u jeedsan lahaayeen iyagoo deg degi.

58. waxaa ka mid ah kuwo kugu ceebin sadaqada (sakada) haddii la siiyana raalli noqon haddaan la siinninna cadhoon.

59. hadday ku raalli noqdaan waxay siin Eebe iyo rasuulkiisu, oy dhahaan waxaa nagu filan Eebe, wuxuu naga siin Eebe fadligiisa, rasuulkiisuna wuu nasiin, Anaguna Eebe unbaan wax ka doonaynaa (saasaa u khayroon).

وَهُمْ كَافِرُونَ ﴿٥٥﴾

وَيَخْلِفُونَ بِأَلْفِهِمْ أَلْفَهُمْ لَمِنكُمْ وَمَا هُمْ بِمِنكُمْ

وَأَلَكْتُمْ هُمْ قَوْمٌ بِفُرُوقٍ ﴿٥٦﴾

لَوْ يَجِدُونَ مَلْجَأًا أَوْ مَقْرَنًا أَوْ مَدَّخَلًا لَوَلَّوْا إِلَيْهِ

وَهُمْ يَجْتَمِعُونَ ﴿٥٧﴾

وَمِنْهُمْ مَن يَلْمُزُكَ فِي الصَّدَقَاتِ فَإِنْ أُعْطُوا

مِنْهَا رَضُوا وَإِنْ لَمْ يُعْطُوا مِنْهَا إِذَا هُمْ

يَسْتَخْطُونَ ﴿٥٨﴾

وَلَوْ أَنَّهُمْ رَضُوا مَا آتَاهُمُ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَقَالُوا

حَسْبُنَا اللَّهُ سَيُؤْتِينَا اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ وَرَسُولُهُ

إِنَّا إِلَى اللَّهِ رَاغِبُونَ ﴿٥٩﴾

Wax lala yaabana ma aha ama la wanaajisto xoolahooda iyo caruurtooda waxay un ku noqon khasaare aakharo iyo Adduunbe, waxayna dhiman iyagoo gaalo ah, waxayna ku dhaaran inay la jiraan muslimiinta lamana jiraan ee way cabsan, hadday helaan meelay ku cararaanna way ku dag degi, qaarkoodna waxay ku ceebayn jireen nabgia (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeעהe) iyo muslimiinta waxay bixin, iyagoo haddii wax la siiyana raalli noqda hadday waayaanna cadhoon. haddayse ku raalli noqdaan waxay Eebe iyo rasuulkiisu siiyaan oy ku kalsoonaadaan Eebe iyo rasuulkiisa saasaa u wanaag badnaan lahayd, tilmaantaasna waa tilmaanta munaafiqiinta, had iyo jeerna waxay ceebeeyaan oo xumaan iyo shar la doonaan muslimiinta sidii kii ku yidhi Nabiga: caddaalad maadan falin, ee uu ku yidhi: yaa caddaalad fali haddaanan caddaalad falin, xumaan badanaa kuwaasu. At-Tawbah (55-59).

60. sadaqada (Zakada) waxaa uun muta fuqarada, masaakiinta, kuwa ka shaqeyya, kuwa la soo dhawayn quluubtooda, kuwa la xorayn, kuwa (xaqa) ku daynoobay, jidka Eebe iyo socdaalka, waana wax Eebe Faral yeelay, ilaahayna waa oge falsan.

61. waxaa ka mid ah (munaafiqiinta) kuwa dhiba nabiga oo dhaha waa wax walba maqle, waxaad dhahdaa waa Khayr maqilihiinna wuxuuna rumayn Eebe, wuxuuna u rumayn Mu'miniinta, waana u naxariistaa kuwa rumeeyey oo idinka mid ah, kuwa dhiba Rasuulka Eebe waxay mudan cadaab daran.

﴿إِنَّمَا الصَّدَقَتُ لِلْفُقَرَاءِ وَالْمَسْكِينِ وَالْعَمِلِينَ

عَلَيْهَا وَالْمُؤَلَّفَةِ قُلُوبُهُمْ وَفِي الرِّقَابِ

وَالْفَرَسِينَ وَفِي سَبِيلِ اللَّهِ وَأَنَّ السَّبِيلَ

فَرِيضَةٌ مِّنَ اللَّهِ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٦٠﴾

وَمِنْهُمْ الَّذِينَ يُؤْذُونَ النَّبِيَّ وَيَقُولُونَ هُوَ ذُنُّ

قُلْ أَذُنٌ خَيْرٌ لَّكُمْ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَيُؤْمِنُ

لِلْمُؤْمِنِينَ وَرَحْمَةٌ لِلَّذِينَ آمَنُوا

مِنْكُمْ وَالَّذِينَ يُؤْذُونَ رَسُولَ اللَّهِ لَهُمْ عَذَابٌ

أَلِيمٌ ﴿٦١﴾

62. waxay idiinku dhaaran Eebe inay idin raalli galinayaan, Eebe iyo Rasuulkiisa yaa mudnaan badan inay raalli galiyaan hadday Mu'miniin yihiin.

يَخْلِفُونَ بِاللَّهِ لَكُمُ لِرِضْوَانِهِ وَاللَّهُ
وَرَسُولُهُ أَحَقُّ أَنْ يُرْضَوْهُ إِنْ كُنْتُمْ
مُؤْمِنِينَ ﴿٦٢﴾

63. miyeyna ogayn ciddii la dagaallanta (oo khilaafta) Eebe iyo rasuulkiisa inuu mudan naarta jahannama, kuna waari dhexdeeda, arrintaasuna waa dulli wayn.

أَلَمْ يَعْلَمُوا أَنَّهُ رَمَّنْ مُحَمَّدٍ وَاللَّهُ وَرَسُولُهُ قَاتِلَهُ
تَارِكِهِمْ خَلْدًا فِيهَا ذَلِكَ الْخِزْيُ
الْعَظِيمُ ﴿٦٣﴾

Zakada waxaa Mudan siddeeddaas nooc ee Eebe sheegay isagoon cidna u dayn, taasna waxay ku tusin inay bixinta zakadu waaji btahay, in siddeeddaas kooxood mudanyihinna wanaagga iyo naxariisashada diinta islaamku ma aha hadal iyo war la sheeg sheego, saas darteed waa in la bixiyo zakada lana siiyo dadkaas iyo meelahaas mudan.

Tan kale munaafiqiintu waa cudur ku dhex jira muslimiinta wax kastana wax ka sheegi, waxaana ka mid ah inay nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku dhahayeen waa wax walba maqle, khayrka iyo wanaagga yuuna maqlayey, ciddiise dhibta waxay mudan cadaab daran, Dhaar beena yeyna maraan si ay u raalli galiyaan muslimiinta, Eebbaase mudan in la raalli galiyo, ciddii la colloowda Eebe iyo rasuulkana wuxuu mudan cadaab daran. At-Tawbah (60-63).

64. waxay ka digtoon yihiin munaafiqiintu in lagu soo dajiyo suurad ka warrami waxa quluubtooda ku sugan, waxaad dhahdaa jeesjeesa Eebe wuxuu soo bixin waxaad ka digtoontihiin (cabsanaysaan).

يَحْذَرُ الْمُنَافِقُونَ أَنْ تُنَزَّلَ عَلَيْهِمْ سُورَةٌ
تُنذِرُهُمْ بِمَا فَعَلُوا بِهِمْ قُلِ اسْتَغْفِرُوا إِنَّ اللَّهَ
مُخْرِجٌ مَّا تَحْذَرُونَ ﴿٦٤﴾

65. haddaad warsato waxay dhihi waan un yar tiimbanaynay oon ciyaaraynay, waxaad dhahdaa ma Eebe iyo aayaadkiisa iyo Rasuulkiisa yaad ku jees jeesayseen.

وَلَيْن سَأَلْتَهُمْ لَيَقُولُنَّ إِنَّمَا كُنَّا نَخْوُشُ
وَنَلْعَبُ قُلْ أَبِاللَّهِ وَآيَاتِهِ وَرَسُولِهِ كُنْتُمْ
تَسْتَهْزِئُونَ ﴿٦٥﴾

66. ha cudur daarannina waad gaalowdeen Rumayn ka dib, haddaan cafinnno koox idinka mid ah waxaan cadaabaynaa koox, illeen iyagu waa dambii-layaale.

لَا تَعْتَدِرُوا قَدْفَكَرْتُمْ بَعْدَ إِيمَانِكُمْ إِنْ نَعَفَ عَنْ
طَائِفَةٍ مِنْكُمْ تَعْدَبْ طَائِفَةٌ بِأَنَّهُمْ كَانُوا
مُجْرِمِينَ ﴿٦٦﴾

67. munaafiqiintu rag iyo haweenba qaarkood qaarka kale yuu ka ahaaday, waxayna faraan xumaanta, waxayna ka reebaan wanaagga, waxayna laabaan gacmahooda (wax ma bixiyaan) Eebayna halmaameen isna aabayeldarro yuu kula dhaqmay, munaafiqiin iyaga umbaa faasiqiin ah.

الْمُنَافِقُونَ وَالْمُنَافِقَاتُ بَعْضُهُمْ مِنْ بَعْضٍ
يَأْمُرُونَ بِالْمُنْكَرِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ
الْمَعْرُوفِ وَيَقْبِضُونَ أَيْدِيَهُمْ نَسُوا اللَّهَ
فَنَسِيَهُمْ إِنَّ الْمُنَافِقِينَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴿٦٧﴾

68. wuxuuna Eebe u yaboohay Munaafiqiintaa rag iyo haweenba iyo gaalada Naarta Jahannamo, wayna ku dhex waari, iyadaana ku filan, waxaana lacnaday Eebe, waxayna mudan cadaab jooga ah.

وَعَدَّ اللَّهُ الْمُنَافِقِينَ وَالْمُنَافِقَاتِ وَالْكُفَّارَ نَارَ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا هِيَ حَسْبُهُمْ وَلَعْنَةُ اللَّهِ وَاللَّهُ عَذَابٌ مُّقِيمٌ ﴿٦٨﴾

Munaafiqiinta rag iyo haweenba waa colka diinta islaamka iyo Muslimiinta waxayna ku jees jeesi kuna ciyaareen Eebe iyo rasuulka iyo xaqa, waxayna is faraan xumaanta wanaaggana way iska reebaan, Eebe iyo xaqana way halmaamaan waxayse mudan cadaab daran oy ku waari kuna dulloobi, illeen waa dambilayaale.

Aayaduhuna waxay ku soo dageen mar ay ku sheekeysanayeen dhibka iyo Xumaanta Muslimiinta lahaayeenna ma kuwanaa iska celin reer ruum, barri baan arkaynaa iyagoo xidh xidhan Munaafiqna wax uma taro muslima wuu uun dhibaa. At-Tawbah (64-68).

69. waxaad la mid tihiin kuwii idinka horreeyey, waxayna ahaayeen kuwo idinka badan xoog iyo xoolo iyo carruur waxayna ku raaxaysteen nasiibkoodii idinkuna waxaad raaxaysateen nasiibkiin siday ugu raaxaysteen kuwii idinka horreeyey nasiibkoodii, waadna dhumbateen xumaanta siday u dhumbadeen, kuwaas waxaa buray camalkoodii ad-duun iyo aakhiraba, kuwaasuna iyaga umbaa khasaaray.

كَالَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ كَانُوا أَشَدَّ مِنْكُمْ قُوَّةً وَأَكْثَرَ أَمْوَالًا وَأَوْلَادًا فَاسْتَمْتَعُوا بِخَلْقِهِمْ فَاسْتَمْتَعْتُمْ بِخَلْقِكُمْ كَمَا اسْتَمْتَعَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ بِخَلْقِهِمْ وَخُضْتُمْ كَالَّذِي خَاضُوا أُولَئِكَ حَظِطُوا أَعْمَالَهُمْ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْخَاسِرُونَ ﴿٦٩﴾

70. miyeyna soo gaadhin warkii kuwii ka horreeyey oo ah qoomkii nabi Nuux, Caad, Thamuud, Qoomkii Nabi Ibraahiim, madyan dadkeedi iyo Qoomkii Nabi Luud, waxay ula timid rasuuldoodii xujooyin, Eebana ma aha mid dulmiya iyagaase naftooda dulmiya.

أَلَمْ يَأْتِهِمْ نَبَأُ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ قَوْمِ نُوحٍ وَعَادٍ وَثَمُودَ وَقَوْمِ إِبْرَاهِيمَ وَأَصْحَابِ مَدْيَنَ وَالْمُؤْتَفِكَةَ أَتَتْهُمْ رُسُلُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَمَا كَانَ اللَّهُ لِيَظْلِمَهُمْ وَلَٰكِن كَانُوا أَنْفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٧٠﴾

Aayadahan wuxuu Eebe ku sheegi inay ku daydeen kuwa xaqa diidi Gaaladii hore kana xoolo, xoog iyo carruur badnaa, waxayna ku raaxaysteen adduunka sidii kuwaas hore, waxayna xumaanta u dhumbadeen siday kuwaas u dhumbadeen, waana buray camalkoodu adduun iyo aakhira, waana kuwo khasaaray. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaad maraysaan waddadii gaaladii Taako taako iyo dhudhun dhudhun xataa hadday galaan god kharaaba waad ka daba galaysaan, sidii qoomamkii ka horreeyey ee Nabiyada beeniyeey markay rasuulladii ula yimaadeen Xujooyin iyo xaq, wayse dulmiyeen naftooda, illeen Eebe wax ma dulmiyee waxaase habboon Rumayn iyo wanaag. At-Tawbah (69-70).

71. Mu'miniinta rag iyo Haweenba qaarkood qaarka (kale) waa u Sokeeye waxayna faraan wanaagga kana reebaan xumaanta, waxayna oogaan salaadda, waxayna bixiyaan Zakada, waxayna Addeecaan Eebe iyo Rasuulkiisa, kuwaas waxaa u naxariisan Eebe, illeen Eebe waa adkaade fal sane.

وَالْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ
يَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ
وَيُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ
وَيُطِيعُونَ أَمْرَ اللَّهِ وَرَسُولَهُ وَأُولَئِكَ سَيَرْحَمُهُمُ
اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٧١﴾

72. wuxuu u yaboohay Eebe Mu'miniinta Rag iyo haweenba Jannnooyin ay socoto dhexdeeda Wabiyaalkii iyagoo ku waari dhexdeeda, iyo guryo wanaagsan oo Jannada cadnin (Nagaadiga), Raalli ahaanshaha Eebaana ka wayn, arrintaasuna waa uun liibaanta wayn.

وَعَدَّ اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ
تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا وَمَسَاكِنَ طَيِّبَةً
فِي جَنَّاتٍ عَدْنٍ وَرِضْوَانٍ مِنَ اللَّهِ أَكْبَرَ ذَلِكَ
هُوَ الْقَوْمُ الْعَظِيمُ ﴿٧٢﴾

Aayadahani waxay caddeyn in Mu'miniinta Rag iyo Haweenba sokeeye iyo Qaraabo isu gargaara yihiin, wanaagga is faraan, xumaantana iskarebaan, Salaaddana si wanaaga u oogaan, Zakadana bixiyaan Eebe iyo Rasuulkiisana adeecaan, waana kuwa naxariista Eebe awoodda lehe falka san muta. Wuxuuna Eebe u yaboodhay Jannnooyin aan laga guuraynin oo Wabiyaal dhex socdaa, isagoo raalli ahaanshaha Ilaahay ka wayn yahay, waana Liibaanta ugu wayn arrintaasi, waxaana halkaas ka muuqda siday u kala duwanyihiin Tilmaanta Munaafiqiinta iyo tan mumiiniinta, waxaana ka mid ah tilmaanta Mu'miniinta iany isku tiirsanaadaan, isuna naxariistaan, siduu rasuulku yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Mu'minku Mu'minka wuxuu u yahay sida dhista qaarkeed qaarka kale u Xoojiyo iyo Xadiithka kale ee caddayn inay jidh kaliya yihiin isuna xanuunsan, sidaas darteed khilaf badane, xumaan fale, naxariis yare, ma gargaare, mu'min toosan ma yahay? At-Tawbah (71-72).

73. Nabiyouw la jahaad gaalada iyo Munaafiqiinta, kuna darrow, dheelmadkooduna waa Naarta Jahannamo iyadaana u xun meel loo ahaan.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ جَاهَدُوا كُفَّارًا وَالْمُنَافِقِينَ وَأَعْلَظْ
عَلَيْهِمْ وَمَا أَوْلَاهُمْ جَهَنَّمُ وَيَسَّ الْمَصِيرُ ﴿٧٣﴾

74. waxay ku dhaaran inayna dhihin (hadal xun) iyagoo yidhi hadal gaalnimmo ayna gaalooheen Islaanimmo (muuqa) kadib, ayna dooneen waxayna gaadhin, waxayna ku naceen ku hodnaynta Eebe iyo Rasuulkiisa fadligiisa, hadday toobadkeenaan khayr bay u tahay, hadday jeedsadaanna wuxuu Eebe cadaabi cadaab daran adduun iyo aakhiraba, gargaarana kuma leh dhulka dhexdiisa iyo sokeeye midna.

يَجْلِفُونَ بِاللَّهِ مَا قَالُوا وَلَقَدْ قَالُوا كَلِمَةَ الْكُفْرِ
وَكَفَرُوا بَعْدَ إِسْلَامِهِمْ وَهُمْ أُولِي عِمَالٍ وَإِنَّمَا
نَقَمُوا إِلَّآ أَن آغْنَاهُمْ اللَّهُ وَرَسُولُهُ مِنْ فَضْلِهِ
فَإِن يَتُوبُوا يَكُ خَيْرًا لَهُمْ وَإِن يَتُوبُوا يَعِدْ بَعْضُهُمْ
عَدَاِبَ الْآلِيمِ أَفِ الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَمَا لَهُمْ فِي
الْأَرْضِ مِنْ لِيٍّ وَلَا تَصَدِيرٍ ﴿٧٤﴾

Eebe wuxuu faray nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu la jahaado Gaalada iyo munaafiqiinta kuna darraado Ayna helin jileec illeen Hoygoodoo waa Naartii jahannamee, waxayna ku dhaartaan Been iyo Gaalnimo intay islaannimo Muuqa muujiyeen ka dib, way dooneen, waxayna la cadhoodeen u Nicmeynta Eebe iyo Rasuulkiisa, hadday toobad keenaanna way u ficantahay, hadday jeedsadaanna Eebe wuxuu u cadaabi si daran Adduun iyo aakhiraba, mana helayaan gargaare, Taasina waxay ku tusin xumaanta gaalada, munaafiqiinta, diin laawayaasha iyo xaq diidayaasha, ayna habboontahay in laga foojignaado. At-Tawbah (73-74).

75. waxaa ka mid ah kuwo la ballamay Eebe hadduu wax ka siiyo fadligiisa inuu sadaqaysto noqdana kuwa suuban.

* وَمَنْ مِّنْهُمْ مَّنْ عَلَيْهِ لَيْنٌ أَتَانَا مِنْ فَضْلِهِ
لَتَصَّدَّقَنَّ وَلَتَكُونَنَّ مِنَ الصَّالِحِينَ ﴿٧٥﴾

76. markuu wax ka siiyey fadligiisa ay ku bakhayleen jeedsadeenna iyagoo diidi.

فَأَمَّا أَتَاهُمْ مِنْ فَضْلِهِ بَخِلُوا بِهِ وَتَوَلَّوْا
وَهُمْ مُّعْرِضُونَ ﴿٧٦﴾

77. wuxuu ku reebay quluubtooda munaafiqnimo tan iyo maalintay la kulmi ku baajintooda Eebe waxay kula ballantameen iyo beeninitoodii darteed.

فَأَعْقَبَهُمْ نِفَاقًا فِي قُلُوبِهِمُ إِلَى يَوْمِ يَلْقَوْنَهُ بِمَا
أَخْلَفُوا اللَّهَ مَا وَعَدُوهُ وَبِمَا كَانُوا
يَكْذِبُونَ ﴿٧٧﴾

78. miyeyna ogayn in Eebe ogyahay qarsoodigooda iyo muuqooda iyo in Eebe ogyahay waxa maqan.

أَلَمْ يَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَغْفِرُ سِرَّهُمْ وَنَجْوَاهُمْ
وَأَنَّ اللَّهَ عَلَّمَهُ الْغُيُوبِ ﴿٧٨﴾

79. waa kuwa ku ceebayn kuwa sadaqaysan oo mu'miniinta ah sadaqadooda iyo kuwaan helaynin tabartooda mooyee, way ku jees jeesi, Allana wuu ku Jees Jeesaa iyaga waxayna mudan cadaab daran.

الَّذِينَ يَلْمِزُونَ الْمُطَّوِّعِينَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ فِي
الصَّدَقَاتِ وَالَّذِينَ لَا يَجِدُونَ إِلَّا جُهْدَهُمْ
فَيَسْخَرُونَ مِنْهُمْ سَخِرَ اللَّهُ مِنْهُمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ
أَلِيمٌ ﴿٧٩﴾

Waxaa ka mid ah dabecadda Munaafiqiinta inay ceebeeyaan Musliimiinta waxna ka sheegaan, iyo inay buriyaan ballanka, markuu Eebe wax siiyana ay ka gaalooban Nicmada, kuna bakhaylaan si qalbigoodu ugu waarto munaafiqnimo iyo kufr caloolo, illeen waxay baajiyeen ballankii Eebe waxayna beeniyeen xaqii, sidii iyadoo uusan ogayn Eebe qarsoodigooda iyo muuqooda iyo waxa maqan, waxayna sheegaan fasirayaashu inay aayaduhu ku soo degeen Nin la dhihi jiray Thaclaba oo xoola batay markaas ka tagay cibadaadii Eebe, zakadiina diiday, qisaduse ma sugna, cid kastase way u tallaa hadday xaqa ka leexato, mana haboona in mu'miniinta lagu ceebeeyo waxa yar ee ay awoodaan hadday sadaqaystaan, ciddii cebeysana Eebaa ka abaal marin oo u ciqaabi si daran, waxaana la sheegay in Cabdirixmaan binu coof sadaqaystay wax badan, Asaxaabi kalana ku deeqay wax yar markaasay munaafiqiintii dureen labadiiba.

Diinta islaamkuna ma rabto Ceebeynta, xumaan sheegga iyo xaqiraadda Musliimiinta. At-Tawbah (75-79).

80. ama u dambidhaaf warso ama ha u dambidhaaf warsannin, haddaad u

اسْتَغْفِرْ لَهُمْ أَوْ لَا تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ إِنْ تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ

dambi dhaaf warsato toddobaatan jeer uma dambidhaafo Eebe, illeen iyagu waxay ka gaaloobeen Eebe iyo rasuulkiisa, Eebana ma hanuuniyo qoomka faasiqiinta ah.

81. waxay ku farxeen kuwii ka dib dhacay fadhigoodii rasuulka gadaashiiisa, waxayn naceen inay ku jahaadaan xoolahooda iyo naftooda jidka Eebe, waxayna dhaheen ha ku bixina kulaylka, waxaad dhahdaa naarta jahannamo yaa ka kulayl daran hadday wax kasi.

82. ee ha qosleen wax yar (adduunka), hana ooyeen wax badan (aakhiro), iyadoo laga abaal marin waxay kasbaadeen.

83. hadduu kuu soo celiyo Eebe koox ka mid ah oy kaa idin waydiistaan bixid waxaad dhahdaa bixi maysaan lajirkayga waligiin, lana dagaallami maysaan Col lajirkayga illeen waxaad jeclaateen fadhi markii horaba ee la fadhiya kuwa dib maray.

Munaafiqiintu ma mutaan in loo dambi dhaaf warsado, wuxuuna Eebe Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka reebay inuu u dambidhaaf warsado, illeen waxay ka gaaloobeen Eebe iyo Rasuulkiisa, waxayna noqdeen faasiqiin aan hanuunayn, kuna farxay inay ka hadheen jahaadka Nabigu u baxay, reebatayna xoolahoodii iyo naftoodii, isuna dardaarmay inayna kulaylka ku bixin, waxaase ka dambaysa naartii jahannamo hadday wax kasi, ee adduunka wax yar ha qosleen, aakhiray waxbadan ooyiye, waxaana laga abaal marin waxay kasbanayeen, hadday koox ka mida doonaan inay idinla baxaan diida inay idinla baxaan ama dagaal idinla galaan, illeen waa kuwii markii horaba iska fadhiistaye oo nacay jahaadkee munaafiqiinna waa colka muslimiinta. At-Tawbah (80-83).

84. ha ku tukannin mid ka mid ah oo dhinta waligeed, hana kor istaagin qabrigiisa, illeen waxay ka gaaloobeen Eebe iyo Rasuulkiisa waxayna dhinteen iyagoo faasiqiin ah.

85. ee yeyna ku yaab galinnin xoollahoodu iyo caruurtoodu, wuxuu uun Eebe dooni inuu ku cadaabo adduunka

سَبْعِينَ مَرَّةً فَلَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَهُمْ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ
كَفَرُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ
الْفَاسِقِينَ ﴿٨١﴾

فَوَيْحَ الْمَخْلُوفِينَ بِمَقْعَدِهِمْ خَلَفَ رَسُولُ اللَّهِ وَكَرِهُوا
أَنْ يُجَاهِدُوا بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ
وَقَالُوا لَا تَنْفِرُوا فِي الْحَرْبِ قُلْ نَارُ جَهَنَّمَ أَشَدُّ حَرًّا
لَوْ كَانُوا يَفْقَهُونَ ﴿٨٢﴾

فَلْيَضْحَكُوا قَلِيلًا وَلْيَبْكُوا كَثِيرًا جَزَاءً بِمَا كَانُوا
يَكْسِبُونَ ﴿٨٣﴾

فَإِنْ رَجَعَكَ اللَّهُ إِلَى طَائِفَةٍ مِنْهُمْ فَاسْتَدْعَوْهُمْ
لِلْحُرُوجِ فَقُلْ لَنْ نَخْرُجَ مَعَكُمْ أَبَدًا وَلَنْ نَقْتُلَ مَعَكُمْ
عَدُوًّا إِنَّكُمْ رَضِيتُمْ بِالْقُعُودِ أَوَّلَ مَرَّةٍ فَاقْعُدُوا
مَعَ الْكَافِرِينَ ﴿٨٤﴾

وَلَا تَصَلِّ عَلَى أَحَدٍ مِنْهُمْ مَاتَ أَبَدًا وَلَا تَقُمْ عَلَى
قَبْرِهِ إِنَّهُمْ كَفَرُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَمَأْوَا
هُمْ قُلُوبُهُمْ ﴿٨٥﴾

وَلَا تُعْجِبْكَ أَمْوَالُهُمْ وَأَوْلَادُهُمْ إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ أَنْ
يُعَذِّبَهُمْ بِهَا فِي الدُّنْيَا وَتَرْهَقَ أَنْفُسُهُمْ وَهُمْ

ay baxdana naftoodu iyagoo gaalo ah.

86. marka la soo dejiyo suurad (dhihi) rumeeya Eebe, jahaadana la jirka Rasuulkiisa waxaa idan ku warsada kuwa awoodda leh oo ka mid ah waxayna dhahaan na daa aan noqonno kuwa fadhiyee.

87. Waxay ka raalli noqdeen inay noqdaan kuwa dib maray, waxaana la daboolay quluubtooda waxna ma kaysaan.

Eebe wuxuu ka reebay Nibiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu ku tukado una duceeyo ciddii munaafiqiinta kamida oo dhimata iyo inuu qabrigaada kor istaago, illeen waxay ka gaaloobeen Eebe iyo Rasuulkiisa, waxayna ku dhinteen iaygoo faasiqiine, waxaana la sheegay inay ku soo dagtay aayaddu xaalkii munaafiqiinta, sida Cabdullahi binu ubayi. waana inaadana la yaabin ama waynaysannin xoolaha iyo caruurta munaafiqiinta, aduunkana waa lagu cadaabi waxayna dhiman iyagoo gaalo ah, marka jahaadka la farana waxaa inay iska hadhaan warsada kuwa awoodda leh oo ka mid ah, iyagoo jecel inay xaaska iyo dadka tabarta yar la hadhaan. waxaana la daabacay qalbigooda waxna makasayaan. suuradduna wax badan yey ka waarrami xaalka munaafiqiinta, waxaase habboon in laga digtoonaa camalkooda iyo habkooda oo kale. At-Tawbah (84-87).

88. Rasuulkase iyo kuwa rumeeyey ee la Jira way ku jahaadaan xoolahooda iyo naftooda waxaana kuwaas u sugnaaday khayraad, kuwaaasuna waa uun kuwa Liibaanay.

89. wuxuuna u Darbay Eebe Jannooyin oy socoto dhexdeeda wabiyadii iyagoo ku waari dhexdeeda, taasina waa liibaan wayn.

90. waxaa yimid kuwii cudurdaaranayey oo Reer baadiyaha ahaa in loo idmo (Dib mar) waxaana iska fadhiistay kuwii beeniyey Eebe iyo Rasuulkiiisa, waxaana ku dhici kuwii Gaaloobay oo ka mida cadaab daran.

كَافِرُونَ ﴿٨٥﴾

وَإِذْ أَنْزَلْنَا سُورَةَ أَنْعَامٍ بِاللَّهِ وَجْهِدُوا مَعَ رَسُولِهِ اسْتَعْتَدْنَا أَنْ لَوَلَا الطَّوَلُ مِنْهُمْ وَقَالُوا لَرَنَّا نَكُنْ مَعَ الْقَاعِدِينَ ﴿٨٦﴾

رَضُوا بِأَنْ يَكُونُوا مَعَ الْخَوَالِفِ وَطُبِعَ عَلَى قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٨٧﴾

لَسَكِنَ الرَّسُولَ وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُ جَهْدُوا بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ وَأَوْلِيَّتِكُمْ لَهُمْ الْخَيْرَاتُ وَأَوْلِيَّتِكُمْ هُمْ الْمُقْلِحُونَ ﴿٨٨﴾

أَعَدَّ اللَّهُ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا ذَلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿٨٩﴾

وَجَاءَ الْمُعَذِّبُونَ مِنَ الْأَعْرَابِ لِيُؤْذَنَ لَهُمْ وَقَعَدَ الَّذِينَ كَذَبُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ سَيُصِيبُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٩٠﴾

Rasuulkase iyo Mu'miniinta la jira ee xaqa rumeeyey waxay ku jahaadaan Xoolahooda iyo Naftooda, waxayna mudan wanaag waana kuwa liibaanay, waxayan gali jannooyin ay ku waari, waana liibaanta wayn.

had iyo jeerna way cudur-daaran jireen Ree baadiyaha kuwa ka mida, wayna iska fadhiisteen kuwii beeniyey Eebe iyo Rasuulkiisa, waxaase haleeli cadaab daran. Taasina waxay muujin Xumaanta Nolosha munaafiqiinta iyo siday qas iyo lab iyo wareerin ugula Dhex noolaayeen Muslimiinta, Munaafiqiinna wanaag iyo sharaf waa ka fogyihiin. At-Tawbah (88-90).

91. dhib ma saarra kuwa tabarta yar, kuwa buka iyo kuwaan helayn waxay bixiyaan, hadday u naseexeeyaan (Diinta) Eebe iyo Rasuulkiisa, kuwa sama falana jid laguma leh Eebana waa Dambi dhaafe Naxariista.

لَيْسَ عَلَى الضُّعَفَاءِ وَلَا عَلَى الْمَرْضَى وَلَا عَلَى الَّذِينَ لَا يَجِدُونَ مَا يَنْفِقُونَ حَرَجٌ إِذَا نَصَحُوا لِلَّهِ وَرَسُولِهِ مَا عَلَى الْمُحْسِنِينَ مِنْ سَبِيلٍ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٩١﴾

92. kuwiina dhib masaarra kuu yimid inaad xambaarto (Gaadiid siisid) markaas aad ku tidhi ma helayo waxaan idinku xambaaro, markaas jeedsaday iyagoo indhahoodu la daadan illin walbahaar inayna helin waxay bixiyaan.

وَلَا عَلَى الَّذِينَ إِذَا مَا اتَّوَكَّلُوا لَمْ يُحْمَلْهُمُ ثِقَلٌ وَلَا تَقْضَىٰ مِنَ الْدَمْعِ حَزَنًا أَلَّا يَجِدُوا مَا يَنْفِقُونَ ﴿٩٢﴾

93. waxaa uun jid lagu leeyahay kuwa ku idan warsada iyagoo hodana oo ka raalli noqday inay ka midnoqdaan kuwa hadhay (Xaaska) wuxuuna Eebe daabacay quluubtooda waxna ma oga.

* إِنَّمَا السَّبِيلُ عَلَى الَّذِينَ يَسْتَأْذِنُوكَ وَهُمْ أَغْنِيَاءُ رِضْوَانًا يَكُونُوا مِنَ الْكَاذِبِينَ وَطَمَعًا اللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٩٣﴾

Jahaadkuna ma aha in cid walba lagu dhibi ee waxaa uun laga rabaa ciddii awoodda, saas darteed dambi ma saarra kuwa tabarta yar, kuwa buka, kuwaan helayn waxay ku bixiyaan jahaadka, hadday niyadsamaadaan, sidoo kale dambi ma saarra kuwii Nabiga u yimid iyagoo warsan inuu siiyo gaadiid ay ku jahaadaan, markaas noqday iyagoo ooyi oo walbahaarsan inayna helin waxay bixiyaan, waxaase jid lagu leeyahay kuwa xoolaha leh oo Jeclaaday inay ka mid noqdaan kuwa iska fadhiistay, waana kuwo la daabacay qalbigooda oon wax ogayn, Taasina waxay muujin Waajibnimada Jahaadka, Difaaca xaqa iyo diinta islaamka, iyo inaan waxba laga hagraniin u shaqaynta diinta iyo Xaqa. At-Tawbah (91-93).

94. way idiin cudurdaaran markaad u noqotaan xaggooda, waxaad dhahdaan ha cudurdaarannina idiin rumeynmeeynee, wuu nooga warramay Eebe Xaalkiinne, Eebana wuu arkaa camalkiinne iyo rasuulkiisu, markaasna waxaa laydiin Celin Eebaha og waxa maqan iyo waxaa muuqda oo idiinka warrami waxaad camal falayseen.

يَعْتَذِرُونَ إِلَيْكُمْ إِذْ رَجَعْتُمْ إِلَيْهِمْ قُلْ لَا تَعْتَذِرُونَ لِي أَن آذَنُكُمْ فَذَنبًا إِنَّا اللَّهُ مِنْ أَجْبَارِكُمْ وَسَيَرَى اللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ يُؤْتِرْزُونَ إِلَىٰ آلِهِمُ الْعَنَابِ وَالْمُهَاجِرِينَ الَّذِينَ هَاجَرُوا إِلَىٰ آلِهِمْ بِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿٩٤﴾

95. way idiin dhaaran markaad u gaddoontaan xaggooda inaad ka jeed-

سَيَحْلِفُونَ بِاللَّهِ لَكُمْ إِذَا انْقَلَبْتُمْ إِلَيْهِمْ

sataan ee iskaga jeedsada iyagu waa wasakhe hoygooduna waa jahannamee waana ka abaal marin waxay kasbanaayeen.

96. way idiin dhaaran inaad ka raalli noqotaan, haddaad ka raalli noqotaan Eebe kama raalli noqdo qoomka faasiqiinta ah.

لَتُعْرَضُوا عَنْهُمْ فَأَعْرِضُوا عَنْهُمْ إِنَّهُمْ رَجِسٌ
وَمَا أُولَئِكَ جَهَنَّمَ جَزَاءُ يَمَا كَانُوا
يَكْسِبُونَ ﴿١٥﴾

يَخْلُقُونَ لَكُمْ لَتَرْضَوْا عَنْهُمْ فَإِن تَرْضَوْا
عَنْهُمْ فَإِنَّ اللَّهَ لَا يَرْضَىٰ عَنِ الْقَوْمِ
الْفَاسِقِينَ ﴿١٦﴾

Markay Muslimiintii u baxeen Dagaalkii iyo Jahaadkii Tabuuk Munaafiqiintii way iska hadheen iyagoo wax dana ah sheeg sheegan, markay muslimiintii ku soo noqdeen Madiinana waxay bilaabeen Munaafiqiintii inay Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ay u cudurdaaranyi Eebase waa ogyahay dhaartooda beenta ah iyo cudurdaarkooda aan wax kajirin oy ku dooni inay ku raalli galiyaan Muslimiinta, waase kuwo xun oo gali naarta jahannamo, Eebana kama raalli aha camalkooda. Taasina waxay kuu adkeyn sidaan wax badan soo sheegnay inaan Munaafiq, Gaal, Diin laawe iyo Muslim waxba ka dhaxaynin isku ujeeddana ahayn, kala qaadeenna Labo waddo oo kala duwan. At-Tawbah (94-96).

97. Reer baadiyaha ugu daran Gaalnimada iyo Munaafaqnimada, mudanna inayna waxba ka ogayn xuduudda (Soothdimaha) waxa Eebe ku soo Dejiyey Rasuulkiisa, Eebena waa oge fal san.

الْأَعْرَابُ أَشَدُّ كُفْرًا وَبِغَاةً وَأَعْدُوًّا
حَدُودَ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ عَلَىٰ رَسُولِهِ وَاللَّهُ عَلِيمٌ
حَكِيمٌ ﴿١٧﴾

98. Reer baadiyaha waxaa ka mida kuwo kayeelan waxay bixin dayn Bax oo kale, oo idin la sugi dhibaato korkooda ha ahaato wareegga xumaanta, Eebana waa maqle og.

وَمِنَ الْأَعْرَابِ مَن يَتَّخِذُ مَا يُبْفِقُ مَغْرَمًا
وَيَتْرُكُ بِكُمُ الدَّوَابِرَ عَلَيْهِمْ دَائِرَةُ السَّوْءِ
وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٨﴾

99. Reer baadiyaha waxaa ka mida kuwo rumeyn Eebe iyo maalinta aakhiro kana yeelan wuxuu bixin dhawaansho Eebe agtiisa, iyo u ducaaynta Rasuulka (Iyaga) taasi waa dhawaanshahooda wuxuuna galin Eebe naxariistiisa, illeen Eebe waa dambi dhaafe naxariista.

وَمِنَ الْأَعْرَابِ مَن يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ
الْآخِرِ وَتَتَّخِذُ مَا يُبْفِقُ قُرْبَاتٍ عِنْدَ اللَّهِ
وَصَلَوَاتِ الرَّسُولِ أَلَا إِنَّهَا قُرْبَةٌ
لَّهُمْ سَيَدْخُلُهَا لَهُمْ فِي رَحْمَتِهِ
إِنِ اللَّهُ عَلِيمٌ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٩﴾

Dadkii reer madiina ma wada sinnayn isku midna ma aha, waxaa ka mid ahaa Reer baadiyaha kuwo gaalnimada iyo munaafiqnimada ku fogaaday oo Jaahiliina, iyo kuwo waxa la faray inay bixiyaan oo Zaka ah iyo wixii la mida kala mid yeeli dayn gud oo kale oo culays ku yahay Xumaanna la jecel Muslimiinta, kuwaas balaayadu ha ku dhacdo.

Waxaase ka mid ahaa reebaadiyihii madiina kuwo rumeeyey Eebe, aakhiro, waxay bixinna ka yeelan sadaqo iyo dhawaansho Eebe iyo in Rasuulku u duceeyo, waxayna u noqon sadaqo iyo u dhawaansho Eebe, wuxuuna gelin Eebe Naxariistiisa. Saasayna u kala tageen Muslim iyo Munaafaq iyo Gaal, muslim wuxuu mudanyahay Liibaan, Guul iyo Naxariista Eebaha Awoodda leh. At-Tawbah (97-99).

100. kuwii ku dheereeyey «khayrka» ee horreeyey oo ka mida Muhaajiriinta iyo Ansaar iyo kuwii ku raacay wanaagga Eebaa ka raalli noqday iyana way ka raalli noqdeen, wuxuuna u darbay Jannooyin ay socoto dhexdeeda Wa-biyadii iyagoo ku waari waligood, taasina waa Liibaan wayn.

وَالسَّيِّقُونَ الْأَوَّلُونَ مِنَ الْمُهَاجِرِينَ
وَالْأَنْصَارِ وَالَّذِينَ اتَّبَعُوهُمْ بِإِحْسَانٍ رَضِيَ اللَّهُ
عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ وَأَعَدَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي
تحتها الأنهارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا ذَلِكَ
الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿١٠٠﴾

101. gaararkiinna waxaa ka mida ree-baadiye Munaafiqiina, Reer Madiinana (waa kamid) waxay ku madax taageen munaafaqnimo, ma ogidin annagaase og. waxaannu cadaabi Labo jeer, mar-kaasaa loo celin cadaab wayn.

وَمِمَّنْ حَوْلَكُم مِّنَ الْأَعْرَابِ مُتَّفِقُونَ وَمِنَ أَهْلِ
الْمَدِينَةِ مَرَدُّوا عَلَى النَّفَاقِ لَا يَعْلَمُهُمْ تَحْنُ
تَعْلَمُهُمْ سَعَدَ لَهُمْ مَرَاتِبٌ ثُمَّ يُنَادُونَ إِلَى
عَذَابٍ عَظِيمٍ ﴿١٠١﴾

102. kuwo kalana waxay qirteen Dambi-gooda, waxayna isku khaldeen Camal fiican iyo mid kale oo xun, Eebe wuxuu mudanyahay inuu ka toobad aqbalo, illeen Eebe waa Dambi dhaafe naxariista.

وَالْآخِرُونَ أَعْرَبُوا بِذُنُوبِهِمْ خَلَطُوا عَمَلًا صَالِحًا
وَالْآخِرَ سَيِّئًا عَسَى اللَّهُ أَن يَتُوبَ عَلَيْهِمْ إِنْ اللَّهُ
عَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٠٢﴾

Kuwii wanaagga ku horreeyey oo Muhaajiriintii iyo Ansaar ka mida iyo inta wanaagga ku raacda Eebaa ka raalli noqda, iyana way ka raalli noqdaan, wuxuuna u darbay jaanooyin ay ku waari waligood, waana Liibaanta u wayn, markale waxay aayaduhu ka warrameen in gaararka magaalada Madiina ahaayeen Munaafiqiin, xataa magaalada dhexdeeda waxaa jiray kuwo ku dheeraaday Munaafaqnimada Dadkuse ma oga ee Eebe umbaa og, wuxuuna u Ciqaabi si daran, kuwo kale yaase jiray oo isku daray camal fiican iyo mid xun qirtayna dambigoodii mudanna in Eebe u dambi dhaaf. Ruuxuna hadduu dambaabo waa inuu Eebe si dhab ah ugu noqdaa uguna toobad keenna. At-Tawbah (100-102).

103. Ka qaad xoolahooda Xagooda sadaqo (zakada) ood Ku daahirin kuna Nadiifin una ducee illeen Ducadaadu Waxay u noqon Xasile, Eebana waa maqle og.

حَدَّثَنَا عَنْ أَهْلِ مَدِينَةَ طَهَّرَهُمْ وَتَرَكْتُهُمْ بِهَا وَصَلَ
عَلَيْهِمْ إِنْ صَلَوَاتِكَ سَكَنَ لَهُمُ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٠٣﴾

104. Miyayna Ogayn in Eebe ka aqbalo Toobadda Addoomadiisa Kana qaado

الرَّيْبَعَاءُ إِنَّ اللَّهَ هُوَ يَقْبَلُ التَّوْبَةَ عَنْ عِبَادِهِ

Sadaqada (Aqbalo) iyo in Eebe yahay kan toobad aqbalka Badan ee Naxariista.

وَيَأْخُذُ الصَّدَقَاتِ وَأَنَّ اللَّهَ هُوَ التَّوَّابُ
الرَّحِيمُ ﴿١٤﴾

105. Waxaad dhahdaa Camal fala wuu arki Eebe Camalkiinna iyo Rasuulkiisu iyo mu'miniintu Waxaana La idiin celin xagga (Eebaha) og Waxa maqan iyo waxa Jooga idiinkana Warrami (abaa-marin) waxaad falayseen.

وَقُلْ أَعْمَلُوا فَسَيَرَى اللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ
وَالْمُؤْمِنُونَ وَسَيُرَدُّونَ إِلَىٰ عِلِّيِّمٍ وَالشَّاهِدِينَ
فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٥﴾

106. Kuwo kalana waxaa dib loogu dhigay amarka Eebe inuu Cadaabo iyo inuu Ka toobad aqbalo, Eebana waa oge Falsan.

وَالْآخَرُونَ مَرْجُونَ لِأَمْرِ اللَّهِ إِنَّمَا يَعِدُّ لَهُمْ وَلِمَا يَتُوبُ
عَلَيْهِمْ وَاللَّهُ عَلَيْهِمْ خَصِيمٌ ﴿١٦﴾

Eebe Wuxuu faray Rasuulkiisa (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu ka qaado xoolaha muslimiinta Zako uu ku daahirin Uguna ducayn, Illeen ducadiisu waa xasilonida muslimiintee, Zakaduna ma aha wax la Dhaafi karo ama la fudaydsan karo, Nabiguna (Naxariis iyo Nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Ahaa mid u duceeya Ruuxii Zako keena, Sidii haweenaydii uu ku yidhi Eebe ha u Naxariisto adiga iyo ninkaagaba. Eebana wuxuu ka aqbalaa Adoomadiisa sadaqaduu ka qaado, Wax kastoo la Fali waa la arki Waxaana dadka loo celin Eebaha og waxa maqan iyo waxa Jooga uu kana abaal marin, Waxaana Xadiith ku sugnaaday: Haddii ruux camal ku falo dhagac aan albaab iyo daaqad lahayn wuxuu u muujin Eebe dadka Meeshuu doono ha ahaadee. Taasina Waxay muujin naxariista Eebe, adayga sakada ogaanshaha Eebe wax walba, u ducaynta dadka sakada bixiya.

Aayadaha danbana waxay ka warrami dad dib uga dhacay duullaankii Tabuuk markay toobadkeeneenna xaalkoodii dib Eebe u dhigay ugu danbayntiina Eebe Wuu ka aqbalay Toobadii illeen Eebe waa naxariistee, inkastoy xuntahay in jahaadka laga hadho ama laga wahsado. At-Tawbah (103-106).

107. Waxaa ka mida kuwo u yeeshay Masaajid, gaalnimo, kala goynta Mu'miniinta iyo darbidida Cid la dagaallantay Eebe iyo Rasuulkiisa mar hore, waxayna ku dhaaran inaannaan doonayn Waxaan wanaag ahayn, Eebana waa ogyahay inay been sheegi.

وَالَّذِينَ اتَّخَذُوا مَسْجِدًا ضِرَارًا وَكُفْرًا
وَتَفْرَقًا بَيْنَ الْمُؤْمِنِينَ وَإِزْوَاجَ الْمُؤْمِنِينَ
اللَّهُ وَرَسُولُهُ مِنْ قَبْلُ وَيُحْلِفُونَ إِنَّا لَأَرَدْنَا إِلَّا
الْحُسْنَ وَاللَّهُ يَشْهَدُ إِنَّهُمْ لَكَاذِبُونَ ﴿١٧﴾

108. ha joogsan dhexdiisa waligaa, Masaajid lagu billaabay maalintii hora-ba Dhawrsasho yaa mudan inaad joogsato Dhexdiisa (Masaajidka Nabiga iyo Quba) waxaa dhex jooga Niman jecel inay is Daahiriyaan Eebana wuu jecel yahay Kuwa is daahiriya.

لَا تَقُمْ فِيهِ أَبَدًا مَسْجِدٌ أُسِّسَ عَلَى التَّقْوَىٰ مِنْ أَوَّلِ
يَوْمٍ أَحَقُّ أَنْ تَقُومَ فِيهِ فِيهِ رِجَالٌ يُحْسِنُونَ
بِظُهُورِهِمْ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُطَهِّرِينَ ﴿١٨﴾

109. Ma Ruux ku billaabay dhismihiisa ka dhawrsasho Eebe iyo rajeyn raalli noqoshadiisa yaa Khayrroon mise Ruux ku billaabay dhismihiisa God dumi dhinaciis oo kula dhici Naarta Jahannamo Eebana ma hanuuniyo Qoomka daalimiinta ah.

أَقَمْنَ أَسَسَ بُيُوتَهُنَّ عَلَى تَقْوَىٰ مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانٍ
خَيْرٌ أَمْ مَنْ أَسَسَ بُيُوتَهُ عَلَىٰ شِقَاجِرٍ هَاوٍ
فَأَنهَارِهِ فِي تَارِحِهِمْ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ
الظَّالِمِينَ ﴿١٠٩﴾

110. Kama tago dhismahooda ay dhi- seen inuu ku Jiro shaki Quluubtooda, intay ka Kala go'do «dhimatana» Qu- luubtoodu, Eebana waa oge falsan.

لَا يَزَالُ بُدِّئُهُمُ الَّذِي بَدَّؤُوا بِهِ فِي قُلُوبِهِمْ إِلَّا
أَن تَقَطَّعَ قُلُوبُهُمْ وَاللَّهُ عَلَيْهِمْ حَكِيمٌ ﴿١١٠﴾

Aayaduhu waxay soo dageen mar Nin Munaafaq ahaa oo dhib badnaa oo la dhihi jiray Abu caamir uu Ka dhisay Masaajidka Quba ee Madiina agtiisa dhismo uuna Masaajid Ku magacaabay si Ciddii xumi ugu gabbato ama ugu shiraan dhibka Muslimiinta, kuna kala geeyo Muslimiinta. Eebana wuu ka reebay Nabiga (naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu ku tukado, illeen waxaa loo dhisay dhib Muslim iyo Gaalnimce iyo xumaane, Waxaase mudan in lagu tuakado Masaajidka Khayrka iyo Wanaagga lagu billaabay markii horaba, dad nadiifa oo Eebe Jecel yahayna ku tukadaan, isku midna ma aha dhismo Khayr iyo dhismo Shar oo dumi oo Jahannamo ku ridi ciddii dhista, oo Shaki, Munaafaqimo iyo xumaan beeri, halkaasna waxaa kaaga muuqda xumaanta kala Gaynta Muslimiinta haba lagu kala geeyo magac khayr u muuqdee, Sida Masaajidka iyo waxyaabo Kale, waxaase fiican oo Waajibta isku duubnida Muslimiinta. At-Tawbah (107-110).

111. Eebe wuxuu kaga gatay Mu'mi- niinta Naftooda iyo Xoolahooda inay janno u ahaato iyagoo ku dagaallami Jidka Eebe oy waxna dili iyana la dili, waana yabooh ku sugan (dhaba) Taw- reed iyo Injiil iyo Quraanka, yaa ka oofin badan ballankiisa Eebe, ku bis- haaraysta gadiddii ood gaddeen kaasina waa uun Liibaanta wayn.

* إِنَّ اللَّهَ اشْتَرَىٰ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ أَنفُسَهُمْ
وَأَمْوَالَهُمْ بِأَن لَهُمُ الْجَنَّةَ يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ
اللَّهِ فَيَقْتُلُونَ وَيُقْتَلُونَ وَعَدَا عَلَيْهِمْ حَقًّا فِي
التَّوَدُّعِ وَالْإِنْجِيلِ وَالْفُرْقَانِ وَمَنْ أَوْفَىٰ
بِعَهْدِهِ مِنَ اللَّهِ فَاسْتَبْشِرُوا بِنِعْمَةِ اللَّهِ
الَّتِي بَايَعْتُمْ بِهِ وَذَلِكَ هُوَ الْقَوْلُ الْعَظِيمُ ﴿١١١﴾

112. waa kuwa toobadkeena, ee caabu- da (Eebe) ee mahdiya, ee saa'ixiinta ah (Sooma oo Jahaada) ee Rukuuca ee Sujuuda, ee fara wanaagga reebana xumaanta, ee dhawra Xuduudda Eebe, ee u Bishaaree Mu'miniinta.

الَّتِي يُبْتَغَىٰ بِهَا السَّلَامُ وَاللَّذِينَ
أَسْلَمُوا مِنَّا فِي الْأَرْضِ وَالسَّلَامُونَ
الَّذِينَ آمَنُوا بِالْمَعْرُوفِ وَالنَّاهُونَ عَنِ
الْمُنْكَرِ وَاللَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ
وَبِشِرِّ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١١٢﴾

Eebe waa naxariis badanyahay, isagaa abuuray Dad, xoolaha, isagaana leh oo hanta Naftooda, iyo xoolahooda, iyo Jannaba, haddana kaga gatay Mu'miniinta Naftooda iyo Xoolahooda Janno, hadday jahaadaan oy xaqa daafacaan, ama wax ha dileen ama iyaga ha la dilee, waana yabooh adag oo Eebe ku

yaboohay Tawreed, Injiil, iyo Quraanka, wax Eebe ka oofin badan ballanna ma jiro, ee ciddii ballan ka qaada ha ku Bishaaraysato iibkooda ah, Liibaanta u wayn, kuwaasuna waa kuwa toobadkeena, ee Ilaah caabuda, ee mahdiya, ee sooma, jahaadana Khayrkana u socdaala, ee salaadda ku dadaala, samahana fara, xumaantana reeba, dhawrana xuduudda Eebe, waana loo bishaareeyey Mu'miniinta. Aayaduhuna waxay muujin qiimaha jahaadka, Naxariista Eebe, Sharafta iyo wanaagga Mu'miniinta, faridda wanaagga, reebidda xumaanta iyo Bishaarada Mu'miniinta. At-Tawbah (111-112).

113. kuma habboona Nabiga iyo kuwa Rumeeyey (Xaqa) inay u dambi dhaaf warsadaan Mushrikiinta «gaalada» haba ahaadeen qaraabadoodee intay u caddaatay kadib inay Ehelka Naarta Jaxiima yihiin.

مَا كَانَ لِلنَّبِيِّ وَالَّذِينَ آمَنُوا أَنْ يَسْتَغْفِرُوا
لِلْمُشْرِكِينَ وَلَوْ كَانُوا أُولَىٰ قُرْبَىٰ مِنْ
بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُمْ أَصْحَابُ الْجَحِيمِ ﴿١١٣﴾

114. ma ahayn u dambi dhaaf doonidii Nabi Ibraahim Aabihiis ballan uu u yaboohay mooyee, markayse u caddaatay inuu Col Eebe yahay wuu iska bari yeelay Xaggiisa, (Nabi) Ibraahim wuxuu ahaa duco (Baryo) badanaha (Eebe) oo dul badan.

وَمَا كَانَ أَسْتَفْقَارُ إِبْرَاهِيمَ لِأبيهِ إِلَّا عَنِ
مَوْعِدٍ وَعَدَّهَا إِتِيَاءَهُ فَمَا تَبَيَّنَ لَهُ وَأَنَّ
عَدُوَّ اللَّهِ تَبَرَّأَ مِنْهُ إِنَّ إِبْرَاهِيمَ لَأَوَّاهٌ حَلِيمٌ ﴿١١٤﴾

115. Eebena ma aha mid dhumiya qoom intuu hanuuniyey ka dib intuu uga cadddeeyo waxay ka dhowrsadaan, Eebana wax kasta waa ogyahay.

وَمَا كَانَتِ اللَّهُ لِيُضِلَّ قَوْمًا بَعْدَ إِذْ هَدَيْتَهُمْ
حَتَّىٰ يَبَيَّنَ لَهُمْ مَا يَتَّقُونَ إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ
عَلِيمٌ ﴿١١٥﴾

116. Eebena waxaa u sugnaaday Xu-kunka Samooyinka iyo Dhulka isagaa-na wax nooleeya waxna dila, isagana wax ka soo hadhay oo wali ah ama gargaara ah ma lehidiin.

إِنَّ اللَّهَ لَهُ مَمْلِكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ يُعْجِزُ
وَيُجِيبُ وَمَا لَكُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ
وَلَا نَصِيرٍ ﴿١١٦﴾

Geeridii Abu dhaalib yey soo degtay aayaddu, wuxuuna Eebe reebay in loo dambi dhaaf warsado cid ku dhimatay waxaan Islaamka ahayn Qaraababa ha ahaatee, mar hadday caddaato inay Naarta Ehelkeeda noqon, Nabi Ibraahimse wuxuu uun u yaboohay Aabihiis inuu u dambi dhaaf warsan markayse u caddaatay inuu col Eebe yahay wuu iska bari yeelay Illeen Nabi Ibraahim wuxuu ahaa Toobad keen badane dulsan.

Caddaaladda Eebana waxaa ka mida inuusan cidna dhumininn isagoon u caddaynin waxa xaqa ah oy ku dhawrasadaan, illeen wax walba wuu ogyahay, wuxuuna leeyahy xukunka samooyinka iyo dhulka, waxna waa Dilaa waxna nooleeyaa, wax ka soo hadhay oo gargaarina ma jiro.

Taasina waxay muujin Awoodda Eebe iyo inaan cidna isku hallayn wanaagga cid kale iyo inaan jacayl cidna lagu hanuunin karin. At-Tawbah (113-116).

117. wuxuu Eebe ka toobad aqbalay Nabiga, Muhaajiriinta iyo Ansaartii raacday Saacaddii cidhiidhiga intay u dhawaatay inay iilato quluub koox ka mida ka dib, markaasuu ka toobad aqbalay, illeen waa u turaha u naxariistee.

لَقَدْ تَابَ اللَّهُ عَلَى النَّبِيِّ وَالْمُهَاجِرِينَ
وَالْأَنْصَارِ الَّذِينَ اتَّبَعُوهُ فِي سَاعَةِ الْمَسْرَعَةِ مِنْ
بَعْدِ مَا كَادَ يَرِيغُ قُلُوبُ فَرِيقٍ مِنْهُمْ ثُمَّ تَابَ
عَلَيْهِمْ إِنَّهُ يَهْتَمِرُهُمْ وَفِي رَجِيمٍ ﴿١١٧﴾

118. saddexdiina wuu (ka toobad aqbalay) la dib mariyey intuu kaga cidhiidhyamo dhulku isagoo waasac ah, kuna cidhiidyantay naftoodu una maleeyeen (Yaqiinsadeen) inayna jirin meel la magan galo oon Eebe ahayn, markaas Eebe ka toobad aqbalay inay toobadkeenaan, Eebana waa toobad aqbale Naxariista.

وَعَلَى الثَّلَاثَةِ الَّذِينَ خُلِفُوا حَتَّىٰ إِذَا ضَاقَتْ عَلَيْهِمْ
الْأَرْضُ بِمَا رَحُبَتْ وَضَاقَتْ عَلَيْهِمْ أَنفُسُهُمْ
وَوَقِنُوا أَن لَّا مَلْجَأَ مِنَ اللَّهِ إِلَّا إِلَيْهِ ثُمَّ تَابَ
عَلَيْهِمْ لِيَتُوبُوا إِنَّ اللَّهَ هُوَ التَّوَّابُ الرَّحِيمُ ﴿١١٨﴾

119. kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada Eebe Noqdana la jirka kuwa runta badan.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَكُونُوا مَعَ
الصَّادِقِينَ ﴿١١٩﴾

Aayadahani waxay ku soo degeen Duullaankii Tabuuk, wuxuuna ahaa waqti aad u daran oo kulul, oo socdaal dheer, illeen madiina iyo Tabuuk waa kala dheeryihiin marka Lug lagu socdee, wuxuuna Eebe waafajiyey wanaagga nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) iyo Muhaajiriintii iyo Ansaartii raacday Saacaddii dhibka markay u dhawaatay in Quluub dad badan iilato oo leexato Eebase ka toobad aqbalay illeen waa u turaha naxariistee.

Saddexdii la dib mariyeyna Eebaa ka toobad aqbalay oo kala ahaa: Kacab Binu Maalik, Muraaro Binu Rabiic iyo Hilaal Binu Umayata, waxayna ahaayeen Niman ficane markaas umbay naftoodu sirtay wayse run sheegeen Eebana waa ka toobad aqbalay, markay naftoodii la cidhiidhyantay, dhulkuna ku yaraaday isna neceen, waxaana lala hadliin kontan maalmo wax ku dhaw, arintaasuna waxay caddayn in jahaadka loo darbado loona baxo markuu waajib, in runta la sheego laguna socdo, Eebana lagu xidhnaado, loona toobadkeeno, kuwa runta sheega ee fala lala jiro, Muslimiintana aan la khayaamin, lana guntin furin iyo in la edbiyo ciddii fasha waxyaalaha kala guntin fura muslimiinta. At-Tawbah (117-119).

120. kuma habboona (uma bannaana) reer Madiino iyo kuwa gaararkeeda ah oo Baadiyaha Carbeeda inay ka gadaal maraan Rasuulka Eebe oy kana Jecladaan naftooda Naftiisa, illeen wixii ku dhaca oo oona, ama dhiba ama gaajo ah Jidka Eebe dhexdiisa ama meeshey ku joogsadaan oo Cadho galin Gaalada iyo waxay Gaadhsiiyaan Colka (Dham-

مَا كَانَ لِأَهْلِ الْمَدِينَةِ وَمَنْ حَوْلَهُمْ مِنَ
الْأَعْرَابِ أَن يَتَخَلَّفُوا عَنْ رَسُولِ اللَّهِ
وَلَا يَرْجِعُوا بِأَنفُسِهِمْ عَنِ نَفْسِهِ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ
لَا يُصِيبُهُمْ ظَمَأٌ وَلَا نَصَبٌ وَلَا مَخْمَصَةٌ فِي
سَبِيلِ اللَّهِ وَلَا يَطْلُونَ مَوْطِئًا يَغِيظُ الْكُفَّارَ
وَلَا يَنَالُونَ مِنَ عَدُوِّ تَيْلَانًا إِلَّا كَتَبَ لَهُمْ بَرَاءَةٌ

maan) waxaa loogu Dhigi camal suuban, Eebana ma halleeyo Ajirka samo falayaasaha.

عَمَلٌ صَالِحٌ إِنَّ اللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ
الْمُحْسِنِينَ ﴿١٢٠﴾

121. waxay Bixiyaan oo yar ama wayn iyo Toggay gooyaanna waa loo qori inuu ka Abaal mariyo Eebe wanaagga waxay falayeen.

وَلَا يَنْفَعُونَ نَفَقَةً صَغِيرَةً وَلَا كَبِيرَةً
وَلَا يَنْقُطُونَ وَادِيًا إِلَّا كَيْبَ لَهُمْ لِيَجْزِيَهُمُ
اللَّهُ أَحْسَنَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٢١﴾

122. mana aha inay Mu'miniinta oo dhan Baxaan, ee may Koox kastaba qaar ka baxdo inay Diinta kasaan, una digaan dadkooda markay u soo noqdaan waxay u dhawdahay inay digtoonaaadane.

﴿ وَمَا كَانَ الْمُؤْمِنُونَ كَأَنَّ قُلُوبَهُمْ
تَفْرَمِنَ كُلِّ فِرْقَةٍ مِنْهُمْ طَائِفَةٌ لِيَتَفَقَّهُوا فِي
الْدينِ وَيُنذِرُوا قَوْمَهُمْ إِذَا رَجَعُوا إِلَيْهِمْ
لَعَلَّهُمْ يَحْذَرُونَ ﴾ ﴿١٢٢﴾

Aayadahanna wuxuu Eebe ku caddayn inayna ku habboonayn reer Madiino iyo kuwa dagan gaarkeeda inay ka gadaal maraan Rasuulka markuu jahaadka u baxo, kana jeclaadaan Naftooda Naftiisa, wixiise lagala kulmo Jidka Eebe oo ah oon, Dhib, gaajo ama meel kasta oo la maro oo gaalada ka cadhaysa ama wixii dhiba oo gaalada lagala kulmo wuxuu Eebe ugu qori camal fiican, Eebana ma halleeyo Ajir iyo wanaag cidda fasho, sidoo kale wixii bixina ama ha yaraato ama ha waynaato iyo Toggay gooyaan waxaa loogu qori Ajirka u wanaagsan, mana aha inaan cidna magaalada ku hadhin ee Jahaad loo wada baxo ee waa in si nidaama iyo qorsha ah qaarna u baxaan qaarna u maamulaan Dadka iyo Magaalada si ciddii baxday markay soo noqoto ay Dadka wax ugu Faa'iideeyaan, Taasina waxay ku tusin in Diinta Islaamku tahay Diin Nidaam. At-Tawbah (120-122).

123. Kuwa Xaqa rumeeyow la dagaal-lama kuwa idinla Xidhiidha ee gaalada ah, hana idinka heleen adayg, ogaadana in Eebe la Jiro kuwa Dhawrsada.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا قَالُوا الَّذِينَ يَلُونَكُمْ مِنَ
الْكُفَّارِ لَيْسُوا بِكُمْ عَنَاقَةَ وَأَعْلَمُوا
أَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُتَّقِينَ ﴿١٢٣﴾

124. marka la soo Dejiyo Suurad waxaa ka mida kuwo (Munaafiqiina) dhihi kiinnay u kordhisay Iimaan, kuwa xaqa rumeeyeyse waxay u kordhisay Iimaan iyagoo Bishaaraysan.

وَإِذَا مَا أَنْزَلْنَا سُورَةً فَمِنْهُمْ مَن يَقُولُ أَيْسُرُ
زَادَتْهُ هَذِهِ إِيمَانًا فَأَمَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا
فَرَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَهُمْ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿١٢٤﴾

125. kuwa quluubta ka bukase waxay u kordhisaa xumaan xumaantoodii (Kale), wayna dhintaan iyagoo gaalo ah.

وَأَمَّا الَّذِينَ فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ فَزَادَتْهُمْ رِجْسًا إِلَى
رِجْسِهِمْ وَمَانُوا وَهُمْ كَافِرُونَ ﴿١٢٥﴾

126. miyeyna arkayn in la Imtixaamo sanad kasta hal jeer ama labo jeer

أَوَّلًا يَرَوْنَ أَنَّهُمْ يُفْتَنُونَ فِي كُلِّ عَامٍ مَّرَّةً

markaas ayan toobadkeenin xusuusa-naynna.

أَمْرَتَيْنِ ثُمَّ لَا يُؤْتُونَ وَلَا هُمْ
يَذْكُرُونَ ﴿١٢٦﴾

127. marka la soo Dejiyo Suurad way dayaan Munafiqiinta qaarkood qaar waxayna isdhahaan ruuxna maydin arkaa markaasay gaddoomaan, Eebe ha iilo Quluubtooda illeen waa kuwo aan wax kasayn.

وَلَا آتَاكُمْ نَزْلَ سُوْرَةٍ تَنْظُرَ بَعْضُهُمْ إِلَىٰ بَعْضٍ
هَلْ يَرْبِكُمْ مِّنْ أَحَدِكُمْ أَنْصَرُوا صِرَافٍ
اللَّهُ فُلُوْبُهُمْ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَفْقَهُونَ ﴿١٢٧﴾

128. waxaa idiin yimid Rasuul idinka mida oyna ku darantahay waxa idin dhiba, idin kuna dadaali, una turid iyo naxariis badan Mu'miniinta.

لَقَدْ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مِّنْ أَنفُسِكُمْ عَزِيزٌ
عَلَيْهِ مَا عَنِتُّمْ حَرِيصٌ عَلَيْكُمْ بِالْمُؤْمِنِينَ
رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢٨﴾

129. haddayse jeedsadaan Dadku wa-xaad dhahdaa ka igu Filanu waa Ilaahay, Alle mooye Ilaah cibaado mudan ma jiro, isagaana talo saartay, waana Eebaha Carshiga wayn.

فَإِن تَوَلَّوْا فَقُلْ حَسْبِيَ اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ عَلَيْهِ
تَوَكَّلْتُ وَهُوَ رَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ ﴿١٢٩﴾

Aayadda hore waxay fari in lala jahaado Gaalada la Dariska ah Muslimiinta illeen Dhib iyo xumaan lagama waayee, oy kuna ogaadaan Muslimiinta Adayg iyo xoog, illeen Eebaa la jiree, tan kale waxay ka warrami Munaafiqiintii marka quraanku soo dego is warsan jiray ruuxuu wax rumayna u kordhiyey, Mu'miniintase waxaa u kordha Iimaan koodoodii hore ka sokow, munaafiqiintuse Cudur iyo Xumaan yey kororsadaan, iyagoo gaalo ah yeyna dhintaan, kumana waana qaataan Imtixaamka had iyo jeer, wayna cararaan oo dusaan marka quraan la soo dejiyo illeen Qalbigoodaa Eebe lilay waxna ma kasayaane, wuxuuna Eebe u soo diray Muslimiinta Rasuul ka mida oo wanaagooda Jecel xumaantoodana neceb, una dadaala Mu'miniinta, una naxariis badan, ciddiise xaqa ka jeedsata waxba kama saarra, illeen Eebaa kaafiye, isaga mooyee ku cibaado mutay ma jiro, lana talo saaran, lehna Awoodda iyo Carshiga wayn, saasayna ku dhammaatay Suuraddii iyadoo caddaysay wax badan oo ah jihaad, wax bixin, Ballanka, Munaafiqiin, iyo inuu Rasuulku yahay Naxariis loo soo diray Caalamka Khayrna la jecel. At-Tawbah (123-129).



Suurat Yuunus

سُورَةُ يُونُسَ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Kalimada hore waxay ku tusin Mucjisada Quraanka, Taasin waa Aayaadka Kitaabka falkasan.

الرَّيْبَ لَكَ ءَايَاتُ الْكِتَابِ الْكَبِيرِ ﴿١﴾

2. Dadka ma waxaa la yaab ku Noqotay inaan u waxyoon Nin ka mida u Dig Dadka, uguna Bishaaree kuwa Rumeeyey inay ku leeyihiin abaalmarin fiican Eebahood agtiisa (camalkoodii dartiis), waxay Dheheen Gaaladiina kani waa Sixirrow Cad.

أَكَانَ لِلنَّاسِ عَجَبًا أَنْ أَوْحَيْنَا إِلَى رَجُلٍ مِنْهُمْ أَنْ أَنْذِرِ النَّاسَ وَبَشِّرِ الَّذِينَ ءَامَنُوا أَنْ لَهُمْ قَدَمٌ صِدْقٍ عِنْدَ رَبِّهِمْ قَالَ الْكٰفِرُونَ إِنَّ هَذَا لَسِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٢﴾

3. Eebihiin waa ka ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Lix Maalmood markaas ka kor noqday carshiga, Isagaana maamula Amarka, wax Shafeecina Idinkiisa la'aantiisa ma jiro, Kaasi waa Eebhiinna idin Barbaariya ee Caabuda, Miyeydaan wax Xusuusanayn.

إِنَّ رَبَّكُمْ اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ اسْتَوَى عَلَى الْعَرْشِ يُدَبِّرُ الْأَمْرَ مَا مِنْ شَيْعٍ إِلَّا مِنْ عِنْدِ رَبِّهِ ءَايَاتُكُمْ وَلَكُمْ رَبُّكُمْ فَاعْبُدُوهُ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٣﴾

Quraanka waxaa ku dhan Xigmo iyo Sharaf, Gaaladuna waxay la Yaabeen in Ruux ka mida lagu soo Dejiyo Waxyi inuu u Digo Dadka una Bishaareeyo Kuwa xaqa Rumeeyey ee Wanaag ku leh Eebe Agtiisa, Gaaladuna waxay ku Sheegeen in Nabigu Saaxir yahay, Eebaha Xaqa ahna waa kan Abuuray Cirka iyo Dhulka isagoo Awood, Sharaf iyo Qudraba Mudan, Isagaa wax Maamula, wax Shafeeci kara Idinkiisa La'aantiisna ma jiro, isagaana Mudan in la Caabudo. Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Markuu Eebe Bixiyey Nabiga Muxamada (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Yey Beeniyeen Carabtu Iyagoo sheegi in Eebe ka waynyahay inuu soo Diro Nabi Dada, Markaasaa Eebe soo Dejiyey Aayadda. Taasina waa Doqonniyadii iyo Madax Adaygoodii, Maxaayeelay Dad waa in uun Dad loo soo diro si uu u Toosiyo. Yuunus (1-3).

4. Xaggiisaa laydiin Celin Dhammaan, Yabooha Eebena waa Xaq, Eebaa Billaaba Abuurka Haddana soo Celin inuu ku Abaal mariyo kuwa Rumeeyey (Xaq) oo falay Camal Fiican, si

إِلَيْهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا وَعَدَ اللَّهُ حَقًّا إِنَّهُ سَيَرْجِعُهُمْ إِلَى رَبِّهِمْ فَأُولَئِكَ تُصَوَّبُ وُجُوهُهُمْ إِلَى الْكَافِرَاتِ وَالْحَافِظَاتِ وَالْمُصَلِّاتِ بِوُجُوهِهِنَّ وَالْمُهَاجِرَاتِ فِي الْأَرْبَابِ وَقَدْ خَلَقْنَاكُمْ وَإِنَّا لَخَالِقُونَ ﴿٤﴾

Caddaalada, kuwa Gaaloobayna waxaa u Sugnaaday Cabbid kulul iyo Cadaab Daran Gaalnimadooda Darteed.

مَنْ حَمِيمٍ وَعَذَابِ أَلِيمٍ مَا كَانُوا يَكْفُرُونَ ﴿١٠﴾

5. Eebe waa kan ka yeelay Qorraxda Ifid Dayaxana Nuur una Qaddaray Meelo ay Socdaan, inaad Ogaataan Tirada Sanooyinka iyo Xisaabta, wuxuu u Abuuray Eebe Arrintaas Xaq, Wuxuuna u Caddayn Aayaadka Ciddii wax Og.

هُوَ الَّذِي جَعَلَ الشَّمْسُ ضِيَاءً وَالْقَمَرَ نُورًا وَقَدَرَهُ مَنَازِلَ لِتَعْلَمُوا عَدَدَ النِّجْدِينَ وَالْحِسَابَ مَا خَلَقَ اللَّهُ ذَلِكَ إِلَّا بِالْحَقِّ يُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿١١﴾

6. Isbadalka Habeenka iyo Maalinta iyo Abuurka Eebe ee Samooyinka iyo Dhulka Aayaadbaa ugu sugan Ciddii Dhawrsan.

إِنَّ فِي آخِزَاتِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ وَمَا خَلَقَ اللَّهُ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿١٢﴾

Xagga Eebaa loo Noqon Dhammaan Yabooha Eebana waa Dhab oo ah in si Caddalada loogu Abaal mariyo kuwa Wanaagga Falay janno, kuwa Gaaloobayna Cadaab daran. Eebana waa ka Dadka ugu Nicmeeyey Qorraxda Ifi iyo Dayaxa Nuuri si waqtiga iyo Xisaabta loogu garto, Habeenka iyo Dharaarta Isbaddelkeedana iyo Abuurka Cirka iyo Dhulka waxaa ku Sugan Calaamooyin Muujin Xaqnimada Eebe iyo Awooddiisa, Ciddii Caqli leh oo Eebe Nuur u Geliyey Qalbiga wuxuu yaqiinsan waynida Awoodda Eebana Abuuray Cirka, Dhulka, Qorraxda, Dayaxa iyo Khalqiga kalaba Mudanna in La Caabudo. Yuunus (4-6).

7. Kuwaan Rajaynayn la Kulan naga kuna Raalli Noqday Nolosha Dhaw kuna Xasilay iyo kuwa Halmaansan Aayaadkannaga.

إِنَّ الَّذِينَ لَا يَرْجُونَ لِقَاءَ نَارٍ وَصُومُوا بِالْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَظَنُّوا أَنَّهُم آتَيْنَا عُقُوبًا ﴿١٣﴾

8. Kuwaas Hooygoodu waa Naar waxy Kasbanayeen Darteed.

أُولَئِكَ مَاؤُهُم نَارٌ بِمَا كَانُوا يَكْفُرُونَ ﴿١٤﴾

9. Kuwa Rumeeyey Xaqa oo falay Camal wanaagsan wuxuu ku Hanuunin Eebahood Iimaankooda, waxaana socon (guryahooda) hoostooda Wabiya-dii, Jannooyinka Naciimo Dhexdeeda iyagoo ku Sugan.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ يَهْدِيهِمْ رَبُّهُم بِإِذْنِهِمْ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهِمُ الْأَنْهَارُ فِي جَنَّاتِ النَّعِيمِ ﴿١٥﴾

10. Yeedhidooduna dhexdeeda waa Eebow waad Nasahantahay, Bariidadooduna waa (Nabadgalyo) Salaan, Ducadooduna waxaa ugu Dambayn Mahad Ilaahbaa leh Eebaha Caalamka ah.

دَعْوَاهُمْ فِيهَا سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ وَتَحِيَّتُهُمْ فِيهَا سَلَامٌ وَأَخْرَجْنَاهُمْ مِنْهَا إِلَى الْجَنَّةِ لِقَاءِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿١٦﴾

11. Hadduu Eebe u Dedejiyo Dadka Xumaanta siday khayrka u Dedejistaan waxaa loo Dhammayn lahaa Ajashooda, Waanuse ku Dayn Kuwaan Rajaynayn la kulankannaga Fasaadkooda iyagoo ku Wareersan.

* وَلَوْ يَعْلَمُ اللَّهُ لِلنَّاسِ أَسْتَعْتَابَهُمْ
بِالْخَيْرِ لَقَضَى إِلَيْهِمْ أَجْلَهُمْ فَذَرَّ الَّذِينَ
لَا يَرْجُونَ لِقَاءَنَا فِي طُغْيَانِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿١١﴾

Wuxuu Eebe kaga Warramay Aayadahan Xaalka kuwaan Eebe la Kulankiisa Rajaynayn, oo Adduunyada ka raalli Noqday, Kuna Xasilay, Halmaamayna Aayaadka Eebe ee Naari u Sugnaatay, iyo Kuwa Rumeeyey Xaqa Wanaaggana falay oo Iimaankoodu hanuunin Jannada Nicmadeedana ku Waari, hadalkooduna yahay Xuska Eebe iyo Salaan iyo Mahad Eebe, waana Labo Kooxood oo kala Fog, oo midna Khasaaray Midna Liibaanay.

Tan kale hadduu Eebe ugu Dedejiyo Dadka Xumaanta sida Khayr waa la Dhammayn lahaa, wuxuuse u dayn daalimiinta xumaanta iyagoo ku indhala, mana ku habboona Ruux Caqli leh inuu dedejisto shar iyo Xumaan, waxaana Xadiith ah: Naftiinna, Caruurtiinna iyo Xoolihiinna ha habaarina ood waafaqdaan Saacad Ijaabo oo laydinka Aqbalo. Yuunus (7-11).

12. Markuu Taabto Dadka dhib wuu Na baryayaa isagoo Jiifa, ama Fadhiya ama Taagan, markaan ka faydno Dhibkana wuu iska Socdaa sidii isagoon Noo baryinba Dhibkii Taabtay, Saasaa loogu Qurxiyey Xadgudbayaasha waxay Falayeen.

وَإِذْ آمَسَّ الْإِنْسَانَ الضُّرُّ دَعَانَا لِجَنبِهِ أَوْ قَاعِدًا
أَوْ قَائِمًا فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُ ضُرَّهُ مَرَّكَانَ لِمَ
يَدْعُنَا إِلَى ضُرِّ مَسَّهُ ۗ كَذَلِكَ نُزِيلُ لِلْمُتَسِّرِينَ مَا
كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٢﴾

13. Waxaan Halaagnay Quruumo idinka horreeyey markay Dulmi faleen, waxayna ula Timid Rasuulladoodii Xujooyin, mana ayan Rumeynayn, Saasaana ku abaal marinnaa Qoomka Dambiilayaasha ah.

وَلَقَدْ أَهَلَكْنَا الْقُرُونِ مِنْ قَبْلِكُمْ لَمَّا ظَلَمُوا
وَجَاءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِالْبَيِّنَاتِ وَمَا كَانُوا لِيُؤْمِنُوا كَذَلِكَ
نَجْزِي الْقَوْمَ الْمُجْرِمِينَ ﴿١٣﴾

14. Markaasaan idinka yeellay kuwo u hadha Dhulka Gadaashood inaan Eegno sidaad Fashaan.

فَجَعَلْنَاكُمْ خَلَائِفَ فِي الْأَرْضِ مِنْ بَعْدِهِمْ
لِنَنْظُرَ كَيْفَ تَعْمَلُونَ ﴿١٤﴾

Waxaa Dadka dabecaddiisa ka mida in markuu Bukooda ama Dhib taabto uu Eebe baryaa isagoo Jiifa ama Fadhiya ama Taagan, markuuse ka faydo Dhibka uu iska Dhaqaaqo sidii isagoon Dhib taaban ama aan Eebe horay u Baryin, Saasna Waxaa loo Qurxiyey Xad gudbayaasha, wuxuuna Eebe halaagay ummado ka horreeyey Gaaladaas markay Dulmi faleen iyagooy Rasuulladoodii ula yimaadeen Xujooyin oyna Beeniyeen, Saasuuna Eebe ku Abaal mariyaa Dambiilayaasha, idinkana laydiinku reebay Dhulka Gadaashood Imtixaan iyo in Eebe Eego isagoo og waxa la falo.

Waxaana Xadiith ah: Aduunyadu waa Macaantahay waana Cagaarantahay, Eebaana idinku Reebay inuu Eego waxaad Fashaan, ee iska Jira Adduunyada iyo Haweenka. Yuunus (12-14).

15. Marka lagu Akhriyo Korkooda Aayaadkannaga oo Cad Cad waxay Dhahaan kuwaan Rajaynayn la kulan-kannaga: noo keen Quraan aan kan ahayn ama baddal, waxaad dhahdaa igama suurowdo inaan ka baddalo agtayda, waxaan uun Raaci waxa lay waxyoodo, waxaan ka cabsan Haddaan Eebe Caasiyo Cadaab Maalin wayn.

وَإِذْ أَنْتَلَىٰ عَلَيْهِمْ آيَاتِنَا يَسْتَكْبِرُونَ
لَا يَرْجُونَ لِقَاءَنَا إِنَّا وَهَّابُونَ
أَوْ بَدِّلُ قُلُوبَهُمْ فَلَا تَأْتِيهِمْ سَاعَةٌ
يَا يَوْمَئِذٍ لَئِنِ اتَّبَعُوا إِلَّا مِطْرًا
مَنْسُوبًا لِّعَذَابِهِمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٥﴾

16. Waxaad Dhahdaa Hadduu doono Eebe idinkuma akhriyeen idinmana Ogaysiiyeen isaga, waxaan ku Nagaa-day Dhexdiinna ka hor Cimri ee Miyeydaan wax kasayn.

قُلْ لَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا تَلَوْتُهُمْ عَلَيْهِمْ
وَلَا آذَنكُمْ بِهِمْ فَمَا قَدْ لَبِثْتُمْ فِيكُمْ
عُمُرًا مِّنْ قَبْلِهِمْ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٦﴾

17. Yaa ka Dulmi Badan Cid ku Been Abuuratay Eebe ama Beeniyey Aayaad-kiisa, Illeen ma Liibaano Dambiilayaal.

فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا
أَوْ كَذَّبَ بِآيَاتِهِ إِنَّهُ لَا يُفْلِحُ
الْمُجْرِمُونَ ﴿١٧﴾

Gaaladii Qureesheed ee Makaad waxay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) marba wax warsadaan oo Xaqa ka Jeedsadaanba waxay warsadeen inuu keeno Quraan kale oo kan ahayn, ama Quraanka wax ka baddalo, markaasuu Eebe ku Celiyey oo faray Nabigu inuu ku Dhaho: Ima suurowdo inaan baddalo, iskaba dhaaf inaan Quraan kale keenee, waxaanse Raaci waxa lay waxyooday, Illeen waxaan ka Cabsan Cadaab Maalin Daran haddaan Caasiyo Eebahaye, waxaana jirtay inaan Muddo idinla Noolaa oonan wax idiin sheegin, ee Quraankan Eebaa soo Dejiyey, hadduu doono waxba idinkuma Akhriyeen idinmana Bareen ee Miyeydaan wax kas ahayn. Cid ka Dulmi Badanna ma jirto Cid ku Been Abuuratay Eebe, ama Beenisay Aayaadkiisa, mana Liibaano Dambiile, waxayna ku Tusin Runnimada Quraanka, inuusan Nabigu iskala imaan karin waxna ka baddali karin, waxna ku dari karin, waxaad arki kartaa Warkii Hiriqla, Cabdullahi Binu Salaamo, Dimaam Binu thaclabo, Camar Binu Caas iyo Dad badan oo kale oo dhammaan Sheegi Runnimada Quraanka iyo nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Yuunus (15-17).

18. Waxay Caabudayaan Eebe ka sokow waxaan Dhibayn Anfaceynna waxayna Odhan kuwanu waa Shafeecayaalkan-naga Eebe Agtiisa, waxaad Dhahdaa: ma waxaad uga warramaysaan Eebe wuxuusan ku Ogayn Samooyinka iyo Dhulka, wuxuu ka Nasahanyahay oo ka Sarreeyaa waxay la Wadaajiyeen Eebe.

وَيَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُمْ
وَلَا يَنْفَعُهُمْ وَيَقُولُونَ هَؤُلَاءِ
شُفَعَاؤُنَا عِنْدَ اللَّهِ
قُلْ أَنْتَبِتُونَ اللَّهَ بِمَا لَا يَعْلَمُ
فِي السَّمَوَاتِ وَلَا فِي الْأَرْضِ
سُبْحَانَهُ وَتَعَالَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿١٨﴾

19. Dadku wuxuu ahaa Ummad Kaliya Markaasay Iskhilaafeen, haddayn Jirin Kalimad Eebahaa u horraysay waa

وَمَا كَانَ النَّاسُ إِلَّا أُمَّةً وَاحِدَةً
فَأَخْتَلَفُوا وَلَوْلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتْ
مِن رَّبِّكَ لَفُضِي بَيْنَهُمْ

la kala Xukmin lahaa Dhexdooda waxay isku diiddanyihiin.

فِيمَا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿١٧﴾

20. Waxay Odhan Gaaladu maa lagaga soo Dejiyo Xagga Allihii Aayad, waxaad dhahdaa waxa Maqan Eebe umbaa iska leh, ee Suga Anuguna waan idinla Sugiye.

وَيَقُولُونَ لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ آيَةٌ مِنْ رَبِّهِ فَقَدْ
إِنَّمَا الْغَيْبُ لِلَّهِ فَانظُرُوا إِلَىٰ مَعَكُمْ مِنْ
الْمُنظَرِينَ ﴿٢٠﴾

Eebe wuxuu ku Diidi Gaaladii la Caabuday Eebe wax kale iyagoo u malayn inay wax tari ama u Shafeeci, markaasuu Eebe u Sheegay in waxaan Eebe ahayn wax Anfacyan, wax Eebe looga Warramina uusan jirin, Eebana wax walba oo Xumaana waa ka Nasahanyahay, Dadkuna waxay ku Sugnaayeen Jid kaliya oo Xaqa ah, Markaasay Iskhilaafeen oo Qaarba wax Eebe ka soo hadhay Caabudeen, Eebase waa Dulbadane oo Dadka Ciqaabta uma soo Dedejiyo iyagoon loo Caddaynin Xaqa. waxayna Codsadeen in Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) lagu soo Dejiyo Aayado Muuqda, Sidii Ushii Nabi Muuse iyo Hashii Nabi Saalax iyo wax la mida, Awooddase Eebaa iska leh, Isagaana soo Dejiya wuxuu Doono ee suga nabiguna waa idinla Sugiye, si aad u aragtaan Xukunka Eebe iyo Awooddiisa.

Dhabtuna waa in Gaalo Dhunsantahay, Halaag iyo Ciqaabna u Dambayso, Xaquuna Cad yahay, Ciddii rabtana u Muuqdo, Mudanyahay in la Raaco, lana Rumeeyo, oo lagu Dhaqmo. Yuunus (18-20).

21. Markaan Dhadhansiinno Dadka Naxariis Dhibaato ka dib Taabatay waxaa soo Baxa iyagoo dhagri Aayaad-kannaga, waxaa Deg-Deg badan dhagarta Alle, Malaa'igtannaduna way Qori waxaad Dhagraysaan.

وَإِذَا أَدْقْنَا لِلنَّاسِ رَحْمَةً مِنْ بَدْوٍ ضَرَّاهُمْ مَسْتَهْزِئِينَ
لَهُمْ مَكْرٌ فِي آيَاتِنَا قُلِ اللَّهُ أَسْرَعُ مَكْرًا لَنْ رُسُلَنَا
يَكْتُبُونَ مَا تَكْمُرُونَ ﴿٢١﴾

22. Eebe waa Kan Idinku Wada Barriga iyo Baddaba, markay ahaadaan Doonta dhexdeeda oo ay ku socdaan Dabayl Fiican oo ay Markaas ku Farxaan oy u Timaaddo Dabayl Daran ugana yi-maaddo hirku Dhan kasta oy una Maleeyaan in la koobay (la Halaagay) waxay Baryaan Eebe iyagoo u kaliyeeli Diinta Iyagoo (Dhihi): Haddaad naga koriso tan waannu kugu Mahdin.

هُوَ الَّذِي يُسَبِّحُكَ فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ حَتَّىٰ إِذَا كُنْتُمْ فِي
الْفُلِكِ وَجرتين بهم يريج طيبتة وفرحوا بها جاءتها
ريج عاصف وجاءهم النوح من كل مكان وظنوا
أنهم أحبط بهم دعوا الله مخلصين له الذين لين
أبجيتنا من هذوه لتكونن من الشكرين ﴿٢٢﴾

23. Markuu koriyeyna Markaas ku xad gudbaan Dhulka Xaq Darro, Dadoow waxaad uun ku Xad Gudbaysaan Naf-tiinna, waa uun Nolosha Dhaw Mar-

فَلَمَّا أَنْجَلَهُمْ إِذَا هُمْ يَبْعُونَ فِي الْأَرْضِ بِعَدْرِ الْأَعْوَىٰ
يَأْتِيهَا النَّاسُ إِنَّمَا بَعَيْتُمْ عَلَىٰ أَنْفُسِكُمْ مَتَاعَ الْحَيَاةِ

kaas Xagganagga laydiin soo Celin waxaana idiinka warramaynaa waxaad Camal Falayseen.

الذِّينَ إِتَّسَمَوْا بِعَمَلِكُمْ فَأَنْزَلْنَا لَهُمُ الْآيَاتِ الْآتِيَاتِ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٢٣﴾

Ayadahan wuxuu Eebe kaga warrami Dabecadda Dadka oo ah in marka Dhibaato Taabatana uu Eebe baryo isuna Dulleeyo, marka Khayr iyo Wanaag uu helana uu isla waynaado oo Kibro, Dhagar iyo Khayaamana la darbado, Eebaase Abaal mariya oo ka Jaasiya, Bad iyo BARRIBANA Eebaa iska leh Mudanna Cibaado, waxaase Dhab ah in Xumaantu ku Noqon Ciddii Fashay Eebena Abaal marin Markuu u Noqdo.

Saas darteed waa in had iyo Jeer Eebe si Dhab ah loo Caabudo, Dhibaato iyo Barwaaqo, Cudur iyo Caafimaad iyo Gaajo iyo Dharagba iwm... Yuunus (21-23).

24. Nolosha Adduunyo waa uun Biyo oo kale oon ka soo Dejinay Samada oo ku Dheehnay waxa ka soo baxa Dhulka oo ah wuxuu Dadku Cuno iyo Xooluhu, markuu dhulku Qurux ka Buuxsamo oy isqurxiso oo Dadkeedu u Maleeyo inay Karaan (Goosashadeeda) yaa waxaa u Yimaadda Amarkannagii Habeen ama Dharaar waxaanna ka yeellaa wax la Shafay sidii iyadoon Shalay Jirin, Saasaana ugu Caddaynay Aayaadka Qoomkii Fikiri.

إِنَّمَا تَمَلُّ الْحَيَوَةَ الدُّنْيَا كَمَا مَاءٌ أَنْزَلْنَاهُ مِنَ السَّمَاءِ فَاخْتَلَطَ بِهِ نَبَاتُ الْأَرْضِ وَمِمَّا يَأْكُلُ النَّاسُ وَالْأَنْعَامُ حَتَّى إِذَا أَخَذَتِ الْأَرْضُ زُخْرُفَهَا وَازَّيَّنَتْ وَظَنَّ أَهْلُهَا أَنَّهُمْ قَادِرُونَ عَلَيْهَا أَتَيْنَاهَا أُمْرًا لَيْلًا وَأَوْتَاهَا فِجَعَلْنَاهَا حَصِيدًا كَأَنْ لَمْ تَغْنَبْ بِالْأَمْسِ كَذَلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٢٤﴾

25. Eebe wuxuu ugu yeedhi (Dadka) Guriga Nabadgalyada (Jannada) wuxuuna ku Hanuuniyaa Cidduu Doono Jid Toosan (Xaqa).

وَاللَّهُ يَدْعُوهم إِلَى دَارِ السَّلَامِ وَيَهْدِي مَنْ يَشَاءُ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٢٥﴾

26. Kuwa Wanaagga Falayna waxaa u Sugnaaday Wanaag (Janno) (Aakhiro), iyo Siyaado (Alla oo la arko) mana haleelo Wajigooda Boodh iyo Dulli midna, kuwaasuna waa Asaxaabta (Ehelka) Jannada, wayna ku waari Dhexdeeda.

* الَّذِينَ أَحْسَنُوا الْحُسْنَىٰ وَزِيَادَةٌ وَلَا يَرْهَقُ وُجُوهَهُمْ قَتَرٌ وَلَا ذِلَّةٌ أُولَٰئِكَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٢٦﴾

Ayayda hore wuxuu Eebe ku Matalay Nolosha Adduunyo Roob soo Da'ay oo Dhulka Cunno ka soo Saaray mid Dad Cuno iyo mid Xoolo Cunaanba, Markii Dhulkii Quruxsanaaday oo ubixii Baxay oo Dooggii isqabsaday oo Dadku u Maleeyeen inuu Goosan Beerhoodii uu amarkii Eebe u yimid oo Eber ka yeelay sidii iyadoon Shalay wax ku oollin.

Nolosha Addunyana waa uun saas oo waxay isukaa qurxisaba markay ku dhaafto ama aad Dhaaftid Wanaageed iyo Quruxdeed wax ma taraan, waxaase wax tara Camal Fiican iyo Jidka Nabadgalyo, waana midka Eebe u Yeedhi kuna Toosiyo Cidduu Doono, Ciddii Wanaagga Fashana waxay heli Wanaag, Janno, Aragga Wajiga Eebaha Deeqda leh iyo Khayr, Dulmi iyo Xumaanna ma arkaan, Jannadana way ku waari.

Waxaa Sugnaaday in marka Jannada la galo loo dhawaaqi Ehelu Jannada in Eebe u oofiyoo Baalankoodii waxayna Arkaan Ilaahood, waana waxa Ilu ugu Farax badantahay uguna Jeceshahay. Yuunus (24-26).

27. kuwa kasbaday xumaan Abaalkood waa Xumaan la mida, waxaana haleeli dulli, wax Eebe ka ilaalinna ma jiro, waxaadna mooddaa in lagu daboolay wajigooda goosin habeen oo mugdi ah, kuwaasu waa Asaxaabta (Ehelka) Naarta, wayna ku waari dhexdeeda.

وَالَّذِينَ كَسَبُوا السَّيِّئَاتِ جَزَاءَ سَيِّئَةٍ بِمِثْلِهَا
وَتَرْهَقُهُمْ ذِلَّةٌ مَّا لَهُمْ مِنَ اللَّهِ مِنْ عَاصِمٍ كَأَنَّمَا
أَغْشَيْتَ وُجُوهُهُمْ قِطْعًا مِّنَ اللَّيْلِ مِظْلَمًا أَتَوَاتَرًا
أَعَصَبُ النَّارِ لَهُمْ فِيهَا حَالِدُونَ ﴿٢٧﴾

28. ka warran maalintaan kulminaynno Dhammaan markaas aan ku dhahaynno kuwii la wadaajiyey (Gaalobay) Meeshiinna ahaada idinka iyo kuwaad la wadaajiseen markaasaan kala gaynay dhexdooda, waxayna dheheen kuway la wadaajiyeen (Eebe) annaga nama aydaan Caabudayn.

وَيَوْمَ نَحْشُرُهُمْ جَمِيعًا ثُمَّ نَقُولُ لِلَّذِينَ أَشْرَكُوا مَكَانَكُمْ
أَنْتُمْ وَشُرَكَائِكُمْ فَوَيْلٌ لَّنَا بَيْنَهُمْ وَوَقَالَ شُرَكَائِهِمْ
مَا كُنَّا لِيَانَا عٰبِدُونَ ﴿٢٨﴾

29. waxaa markhaati dhexdeenna ugu filan Eebe, waxaanna ahayn kuwa Cibaadadiinna Moog.

فَكَفَى بِاللَّهِ شَهِيدًا بَيْنَنَا وَبَيْنَكَ لَوْ كُنَّا عَنَّا
عِبَادَتِكَ كَافِرِينَ ﴿٢٩﴾

30. halkaasay imtixaani (Xaqiiqsan oo hubsan) naf kasta waxay hor marsatay, waxaana loo celiyaa Ilaaha Sayidkooda xaqa ah, waxaana ka dhumay waxay been abuuranayeen.

هٰذَا لِكَيْ تَبْلُغَ كُلَّ نَفْسٍ مَّا أَسْلَفَتْ وَرُدُّوْا إِلَى اللَّهِ
مَوْلَاهُمُ الْحَقِّ وَصَلَّ عَنْهُمْ مَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ﴿٣٠﴾

Waxaa la soo kulmin Maalinta Qiyaame Dadkoo dhan, markaasaa Eebe faraa inay halkooda joogaan iyaga iyo waxay cabudayeen, waana lakala kaxeeyaa, kuwii la Caabudayeyna way dafiraan inay caabudi jireen, oy waliba Eebe marag gashan inayan ogayn cibaadadooda, halkaasaana lagu Imtixaami Naf kasta waxay hor marsatay, waxaana loo celin Dadka Eebahooda xaqa ah, waxaana gaalada ka dhumi waxay abuuranayeen. Waxayna Muujin arrintaasu sida ciddii waxaan Eebe ahayn caabudda ama raacda ay isu dafiri Maalinta Qiyaame, wax ay isu tarina ma jiro. Saas darteed waa in Eebe sharcigiisa la raaco loona hoggaansamo. Yuunus (27-30).

31. waxaad dhahdaa yaa idinka Arsaqa Samada iyo dhulka, yaana hanta maqalka, Aragyada, yaana ka soo bixiya

قُلْ مَنْ يَرْزُقُكُمْ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ أَمَّنْ يَمْلِكُ
السَّمْعَ وَالْأَبْصَرَ وَمَنْ يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَمِيتِ وَيُخْرِجُ

wax Nool wax dhintay, kana soo bixiya
wax Dhintay wax Nool, yaana Maa-
mula Amarka waxay ku odhan Eebe,
waxaad dhahdaa miyeydaan Dhawrsa-
nayn.

أَلَمَيَّتْ مِنَ الْحَيِّ وَمَنْ يُدِيرُ الْأَمْرَ فَسَيَقُولُونَ اللَّهُ
فَقُلْ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٣١﴾

32. kaasi waa Ilaahiin Eebihiinna xaqa
ah, maxaase xaqa ka dambeeya (Ka
duwan) oon baadi ahayn, ee xaggee
layddiin Leexin.

فَذَلِكُمْ اللَّهُ رَبُّكُمُ الْحَقُّ فَمَاذَا بَعَدَ الْحَقِّ إِلَّا
الضَّلَالُ فَإِنَّ يَصْرُوفُ ﴿٣٢﴾

33. Saasay ugu Waajibtay Kalimadii
Eebahaa kuwa faasiqoobay oo ah
inayna rumeeynin (Xaqa).

كَذَلِكَ حَقَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ عَلَى الَّذِينَ فَسَقُوا أَنَّهُمْ
لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٣﴾

34. waxaad dhahdaa ma ka midyihiiin
Shurkadiinna cid billowda Abuurka
Soona celiya, waxaad dhahdaa Eebaa
Bilaaba khalqiga soona celiya ee xaggee
loo iili.

قُلْ هَلْ مِنْ شُرَكَائِكُمْ مَنْ يَبْدُوُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ قُلْ
اللَّهُ يَبْدُوُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ فَإِنَّ تَوْفِيقُونَ ﴿٣٤﴾

35. waxaad dhahdaa ma ka midyahay
shurakadiinna cid ku hanuunin xaqa,
waxaad dhahdaa Eebaa ku hanuunin
Xaqa, mase mid ku hanuunin Xaqa yaa
mudan in la raaco mise midaan hanu-
ninayn in la hanuuniyo mooyee, ma-
xaad leedihiin sideed xukumaysaan.

قُلْ هَلْ مِنْ شُرَكَائِكُمْ مَنْ يَهْدِي إِلَى الْحَقِّ قُلْ اللَّهُ يَهْدِي
لِلْحَقِّ أَفَمَنْ يَهْدِي إِلَى الْحَقِّ أَحَقُّ أَنْ يُتَّبَعَ أَمْ
لَا يَهْدِي إِلَّا أَنْ يَهْدِيَ مَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ ﴿٣٥﴾

36. mana raaco badankoodu waxaan
malo ahayn, malana waxba kama taro
xaqo, Eebana waa ogyahay waxay
falayaan.

وَمَا يُتَّبَعُ أَكْثَرُهُمْ إِلَّا ظَنًّا إِنَّ الظَّنَّ لَا يُغْنِي مِنَ الْحَقِّ
شَيْئًا إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ بِمَا يَفْعَلُونَ ﴿٣٦﴾

Aayaddu waxay ka warrami sida Eebe ugu samo falay Dadka una Arsuqay maqal iyo aragna u siiyey, iyo Awoodda Eebe iyo inuu isagu wax maamulo, waana Eebaha Xaqa ah ee sugan, wax kale oo awood lehna ma jiro, illeen Eebaa kahlqiga Bilaabay soona celine, isagaana hanuuniya Dadka, mudanna in la raaco oo la caabudo, gaaladuse waxaan malo ahayn kuma socdaan, malo iyo shakina waxba xaqa kama taraan Eebana waa ogyahay waxay fali xaq diidayaashu. Taasina waxay muujin in Eebe uun yahay kan Awoodda leh, mudanna in la caabudo, sharcigiisana la raaco, illeen isagaa wax hanuuniyee. Yuunus (31-36).

37. ma aha Quraankanu mid laga been
abuurtay Eebe ka sokow, waase u
rumeeyaha wixii ka horreeyey iyo cad-
daynta Kitaabka (Xukunka), shakina

وَمَا كَانَ هَذَا الْقُرْآنُ أَنْ يُفْتَرَى مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلَكِنْ
نَصْرًا لِلَّذِينَ آمَنُوا بَدِيحًا وَتَفْصِيلًا لِمَا كُنَّ فِيهِ
شَكًّا لَئِنْ لَمْ يَنْزَلْنَا الْقُرْآنَ عَلَى الْبَشَرِ لَكُنَّ
لِلْكَافِرِينَ لَاقِبًا ﴿٣٧﴾

kuma jiro, wuxuuna ka ahaaday Eeba-
ha Caalamka.

مِنْ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٣٧﴾

38. mise waxay odhan wuu Been
abuurtay, waxaad dhahdaa la imaadda
suurad la mida una yeedha cidaad
kartaan oo Eebe ka soo hadhay had-
daad run sheegaysaan.

أَمْ يَقُولُونَ أَفَنَزَّلَهُ اللَّهُ فُلًا فَاتُوا يُسْوَفَ وَمَثَلِ الْيَوْمِ الَّذِي كُنْتُمْ تُكَذِّبُونَ ﴿٣٨﴾

39. waxayse beeniyeen waxayna cilmi-
giisa koobin (Quraanka) uusanna wali u
imaannin aayahiisu, saasayna u bee-
niyeen kuwii ka horreeyey ee bal day
siday noqotay Cidhibtii Daalimiinta.

بَلْ كَذَّبُوا بِمَا لَمْ يُحِبُّوا إِلَهُهٖمْ وَلَمْ يُأْتِهِمْ تَأْوِيلُهُ ۗ كَذَٰلِكَ كَذَّبَ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَانظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الظَّالِمِينَ ﴿٣٩﴾

40. waxaa ka mida Dadka mid rumeyn
Quraanka iyo midaan rumaynayn Ee-
bana waa ogyahay Mufsiidiinta.

وَمِنْهُمْ مَن يُّؤْمِنُ بِهِ ۗ وَمِنْهُمْ مَن لَا يُؤْمِنُ بِهِ ۗ وَرَبُّكَ أَعْلَمُ بِالْمُفْسِدِينَ ﴿٤٠﴾

Quraankuna waa xaq sugan oo Eebe soo Dejiyey, una rumeyn Xaqii ka horreeyey, waana xaq caddeeye, Shakina kuma jiro, Nabiguna iskalama imaannin, iyaba ha keeneen suurad la mida intay u kaalmaystaan cidday doonaan hadday run sheegi, waxayna beeniyeen waxayna cilmiyiisa gaadhin isagoon wali fasirkiiisu u imaannin, waxayse la mid yihiin kuwii ka horreeyey ee beeniyeey Xaqii ee Daalimiinta ahaa lana halaagay, cidna way rumeyn quraanka, midina way beenin, Eebaase og Mufsiidiinta.
Yunus (37-40).

41. hadday ku Beeniyaan waxaad dhah-
daa Anugu waxaan leeyahay Camal-
kayga idinkuna camalkiinna, idinku
bari baad ka tihiin waxaan fali anna
bari baan ka ahay waxaad falaysaan.

وَإِن كَذَّبُوكَ فَقُلْ إِنِّي عَمَلٌ لِّكَ وَلَكُمْ عَمَلُكُمْ أَنْتُمْ بَرِيءُونَ مِمَّا أَعْمَلْتُ وَأَنَا بَرِيءٌ مِّمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٤١﴾

42. waxaa ka mida gaalada kuwo ku
dhagaysan ma adaa wax maqashiin
kara mid dhaga la'oon wax kasayn.

وَمِنْهُمْ مَن يَسْتَعْمُونَ إِلَٰهَكَ أَفَأنتَ تُسْمِعُ الصُّمَّ وَتُرَوِّدُ الْبَصِيرَةَ ۗ كَذَٰلِكَ يُضِلُّ اللَّهُ مَنِ يَشَاءُ ۗ وَإِنَّهُ لَظَلِيمٌ ﴿٤٢﴾

43. waxaana ka mida mid ku soo
dhawri, ma adaa toosin kara mid indha
la'oon wax arkayn.

وَمِنْهُمْ مَن يَنْظُرُ إِلَيْكَ أَفَأنتَ تَهْدِي الْأَعْمَىٰ وَلَوْ كَانَ إِلَّا نَجْمٌ يُدِيرُ الْأَعْيُنَ ۗ كَذَٰلِكَ يُضِلُّ اللَّهُ مَنِ يَشَاءُ ۗ وَإِنَّهُ لَظَلِيمٌ ﴿٤٣﴾

44. Eebe kama dulmiyo Dadka waxba,
hasayeeshee Dadkaa Naftiisa Dulmiya.

إِنَّ اللَّهَ لَا يَظِلُّهُ النَّاسُ سَيِّئًا وَلَكِنَّ النَّاسَ أَنفُسُهُمْ يَظِلُّونَ ﴿٤٤﴾

45. Maalinta la kulminna waxay la mid
noqon iyagoon nagaannin Saacad Maa-
lin mooyee, wayna is aqoonsan dhex-
dooda, waxaana khasaaray kuwa

وَيَوْمَ يُحْشَرُ لَهُمْ كَأَن لَّمْ يَلْسُوا إِلَّا سَاعَةً مِّنَ النَّهَارِ ۗ يَتَعَارَفُونَ بَيْنَهُمْ قَدْ خَسِرَ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِلِقَاءِ اللَّهِ

beeniyey la kulanka Eebe mana ha-
nuunsanayn.

﴿وَمَا كَانُوا مَهْتَدِينَ﴾ ٤٥

Wuxuu Eebe faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu u sheego gaalo hadday beeniyaan inuu bari ka yahay Camalkooda, iyana ay bari ka yihiin camalkiisa, cid dambi cid kale qaadima ayan jirin, cid xaqa ka Indha la' iyo mid ka dhaga la' na cid wax tusi ama maqashiin ma jirto, Eebana cidna ma dulmiyo, Dadkaase Naftooda dulmiya, Maalinta la soo kulminna waxay la mid noqon iyagoon nagaannin Saacad Maalmeed Mooyee. wayna is aqoonsan, waxaana khasaaray kuwa beeniyey la kulanka Eebe mana hanuunsana. Yuunus (41-45).

46. haddaan ku tusinno waxaannu ugu
gooddin qaarkiis ama aan ku oofsanno,
xaggannaga umbaa loo soo celin, mar-
kaasna Eebaa ka maraga waxay fa-
layaan.

﴿وَأَمَّا زَيْنَتُكَ الَّتِي بُعِثَ لَهَا نَذِيرٌ فَقَدْ جَاءَ الْوَعْدَ الْبَاطِلَ أَلَمْ تَرَ أَنَّهُمْ لَمَّا جَاءَهُمْ رَسُولٌ قَدْ آتَيْنَاهُمْ آيَاتِنَا فَكَفَرُوا بِهَا فَأَنزَلْنَاهُمْ فِيهَا نَارًا فَمَنَّ اللَّهُ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ وَالْكَافِرِينَ﴾ ٤٦

47. Ummad kasta Rasuulbay leedahay,
markuu u yimaaddo Rasuulkooduna
waxaa lagu kala xukmin caddaalad
lamana dulmiyo.

﴿وَلِكُلِّ أُمَّةٍ رَّسُولٌ فَإِذَا جَاءَهُمْ رَسُولٌ فَقَدُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَأَخْرَجْنَا لَهُمْ أَقْصَابَهُمْ فِيهَا فَمَنَّا لَخَبِيرٌ﴾ ٤٧

48. waxayna odhan gaaladu waa goor-
ma yaboohaas (Gooddiga) haddaad
runsheegaysaan.

﴿وَيَقُولُونَ مَتَى هَذَا الْوَعْدُ إِن كُنْتُمْ صَادِقِينَ﴾ ٤٨

49. waxaad dhahdaa uma hanto naftay-
da Dhib iyo nacfi midna wuxuu Eebe
doono mooyee, Ummad kastana waxay
leedahay Ajal (Muddo) markay Ajas-
hoodu timaadana lagama dib mariyo
Saacad lagamana hor mariyo.

﴿قُلْ لَا أَمْرٌ لَّكُمْ فِي شَيْءٍ مِّنْهُ لَئِن لَّمْ يَأْتِكُمْ مَتَىٰ نَحْنُ بِالْأَمْرِ إِنَّا كَنُزُولٌ مِّنْ سَمَاءٍ مُّسْتَقِيمَةٍ﴾ ٤٩

Hadduu Eebe tusiyo Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) isagoo nool cigaabta gaalada ku dhici waa wanaag, haddii kalana xagga Eebe umbaa loo soo celin gaalada, Eebana waa u marag waxay fali. Ummad kasta oo rasuul loo soo diro markuu u yimaaddo rasuulkoodu waxaa lagu kala xukmin dhexdooda caddaalad lamana dulmiyo, waxayse odhan waa goorma yaboohu haddaad run sheegaysaan, wuxuuna Eebe faray rasuulka (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu u sheego inuusan hanannin dhib iyo nacfi midna, wuxuu Eebe doono mooyee, Ummad kastana waxay leedahay Muddo ayna ka hor maraynin kana dib dhacaynin.

Taasina waxay sheegi in awoodda iyo ogaanshuba Eebe iska leeyahay. Yuunus (46-49).

50. waxaad dhahdaa bal ka warrama
hadduu idiinku yimaaddo Cadaabkiisu

﴿قُلْ أَرَأَيْتُمْ إِنْ أَتَاكُمْ عَذَابٌ بَغْتَةً أَوْ جَهَارًا﴾ ٥٠

(Eebe) Mir ama Maalin maxay ka dedejisan xaggiisa Dambiilayaashu.

مَاذَا يَسْتَعْجِلُ مِنْهُ الْمُجْرِمُونَ ﴿٥١﴾

51. Mise markuu dhacaad rumaynaysaan hadda idinkoo Dedejisanayey.

أَمْ إِذَا مَا وَقَعَاءَ امْتَنُم بِهِءَءَ الْكُنْ وَقَدْ كُنْتُمْ بِهِءَ

تَسْتَعْجِلُونَ ﴿٥١﴾

52. markaasaa lagu odhan kuwii dulmi falay dhadhamiya cadaabka waaridda, miyaana laydinka abaal marini waxaad kasbanayseen mooyee.

ثُمَّ قِيلَ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا دُونَهُمْ أَتَابَ الْخُلْدِ هَلْ

تُجْرُونَ إِلَّا بِمَا كُنتُمْ تَكْسِبُونَ ﴿٥٢﴾

53. waxay ku warsan ma xaqbaa isagu, dheh: haa, Eebahaybaan ku dhaartaye isagaa Xaqa, idinkuna ma tihidiin kuwo (Eebe) daalin.

* وَاسْتَعْجِلُونَكَ أَحَقُّ هُوَ قَوْلُ إِي وَرَبِّي إِنَّهُ لَحَقٌّ

وَمَا أَنْتُمْ بِمُعْجِزِينَ ﴿٥٣﴾

54. hadday naf kasta oo dulmi fashay leedahay waxa dhulka ku sugan way isku furan lahayd, waxayna qarsan gaaladu shalayto markay Arkaan Cadaabka, waxaana ugu kala xukmin Dhaxdooda Xaq, lamana dulminayo.

وَلَوْ أَنَّ لِكُلِّ نَفْسٍ ظَلَمَتْ مَا فِي الْأَرْضِ لَافْتَدَتْ بِهِءَءَ

وَأَمْرُوا النَّامَةَ لَنَارًا أَرَأَى الْعَذَابَ وَفُضِيَ بَيْنَهُمْ

بِالْقِسْطِ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٥٤﴾

Cadaabka Eebe wax la dedejisto ma aha, illeen markuu dhaco calaalac iyo waan rumeeyey wax ma tartee, waxaase lagu odhan kuwii dulmi falay: Dhadhamiya cadaabka waaridda waxaad kasbanayseen umbaa laydinka Abaal marine. Waxayna gaaladu Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) warsanayeen ma Xaqbaa Quraanku, waxaana Eebe faray inuu yidhaahdo haa waa xaq, Eebahaybaan ku dhaartaye, waxna ma daalisaan hadday nafu hanato iyadoo dulmi fashay waxa dhulka ku sugan way isku furan lahayd, waxayna qarsadaan qoomammo markay arkaan cadaabka, waxaana lagu kala xukmin Caddaalad lamana dulmiyo.

Taasina waxay muujinaysaa Xaqnimada quraanka iyo Nabiga iyo darrida Cadaabka Eebe oy Waajib tahay in la darbado si looga nabadgalo. Yuunus (50-54).

55. Eebana waxaa u sugnaaday waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka, yabooha Eebana waa Xaq, Dadka badankii-suse ma oga.

أَلَا إِنَّ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ الْإِنَّ وَعَدَّ اللَّهُ

حَقًّا وَلَئِنْ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٥﴾

56. Eebaa wax nooleeya waxna dila xaggiisaana laydiin soo celin.

هُوَ حَيٌّ وَيُمِيتُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٥٦﴾

57. Dadow waxaa idiin timid Waano Eebihiiin iyo Caafimaadka waxa Laabta ku sugan iyo Hanuun iyo naxariista Mu'miniinta.

يَأْتِيهَا النَّاسُ فَذَجَّءَ نَكْمٌ مَوْعِظَةٌ مِّنْ رَبِّكَ

وَشِفَاءٌ لِّمَا فِي الصُّدُورِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ

لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٥٧﴾

58. Waxaad dhahdaa Fadliga Eebe iyo Naxriistiisa arrintaas ha ku farxeen

قُلْ يَفْضِلُ اللَّهُ وَرِجْمَتِهِ فَبِذَلِكَ فَلْيَفْرَحُوا هُوَ خَيْرٌ

(Mu'miniintu) iyadaa uga Khayr roon waxay kulmine.

وَمَا يَجْمَعُونَ ﴿٥٨﴾

59. waxaad dhahdaa ka warrama waxa Eebe idiin soo dejiyo oo Risqi ah ood ka yeesheen Qaar ka mida Xaaraan (qaarna) Xalaal, waxaad dhahdaa ma Eebaa idiin idmay mise Eebaad ku Been abuuranaysaan.

قُلْ أَرَأَيْتُمْ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ لَكُمْ مِنَ رِزْقٍ فَجَعَلْنَاهُ حَرَامًا وَحَلَالًا قُلْ إِنَّ اللَّهَ أَدْرَبَ لَكُمْ أَعْيُنَ عَلَى اللَّهِ تَفْتَرُونَ ﴿٥٩﴾

60. Maxay u malayn kuwa ku been abuuran Eebe (inuu ku fali) Maalinta Qiyaame, Eebe waa ka Fadliga ku leh Dadka, badankooduse kuma maha-diyaan.

وَمَا ظَنُّ الَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ بَوْرًا الْقَيْمَةَ إِنَّ اللَّهَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى النَّاسِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٦٠﴾

Eebaana iska leh Xukunka cirka iyo dhulka, yaboohiisuna waa Xaq, mase oga Badankoodu, Isagaana Eebe wax nooleeya waxna dila, Xaggiisaana Loo noqon, waxaana Dadka soo gaadhay Waano xagga Eebe ka timid oo Quraanka ah iyo Caafiyaha waxa Laabta ku sugan iyo Hanuunka iyo Naxariista Mu'miniinta, Fadliga Eebe iyo naxariistiisana ha ku Farxeen, iyadaa ka fiican waxay kulmin oo Aduunyo ahe. Gaaladuna Xaq uma leh inay Risqiga Eebe qaarna xarriimaan qaarna Xalaaleeyaan, Eebe uma idmin sidaas ee way ku Been abuuran Eebe, maxayse u malayn kuwa ku been abuuran Eebe waxay mudan maalinta Qiyaame, Eebaana wax Xalaaleeya, waxna xarriima, laguna mahadiyaa, Awooddana leh. Yuunus (55-60).

61. Wixii Xaala ood ku Sugan tahay, wixii quraana ood Akhrin, wixii camala ood falaysaan waan idin la joognaana (ognahay) markaad dhex galaysaan, kagama Qarsoona Eebahaa waxa u yar Dhulka dhexdiisa iyo Samada, wixii ka yar iyo wixii ka waynba Kitaab cad bay ku suganyihiin.

وَمَا تَكُونُ فِي شَأْنٍ وَمَا تَتْلُوا مِنْهُ مِنْ قُرْآنٍ وَلَا تَسْمَعُونَ مِنْ عَمَلٍ إِلَّا كُنْتُمْ عَلَيْهِمْ شُهُودًا إِذْ تَقُولُونَ فِيهِ وَمَا يَعْرُفُ عَنْ رَبِّكَ مِنْ مِّثْقَالِ ذَرَّةٍ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي السَّمَاءِ وَلَا أَصْغَرَ مِنْ ذَلِكَ وَلَا أَكْبَرَ إِلَّا فِي كِتَابٍ مُبِينٍ ﴿٦١﴾

62. Awliyada Eebana cabsi masaarra mana murugoodaan.

الْآيَاتِ أَوْلِيَاءَ اللَّهُ لَا خَوْفَ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦٢﴾

63. waana kuwa rumeeyay (xaqa) dhawrsadana.

الَّذِينَ آمَنُوا وَكَانُوا يَتَّقُونَ ﴿٦٣﴾

64. Waxaana u sugnaaday Bishaaro nolosha adduunyo iyo Aakhiraba, wax badali Kalimada Eebena ma jiro, taasi-na waa uun Liibaanta wayn.

لَهُمُ الْبَشَرَىٰ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَفِي الْآخِرَةِ لَا يَتَّخِذُونَ لِكُلِّ آلَةٍ آلَةً وَلَا يَسْتَعِينُونَ ﴿٦٤﴾

65. yuuna ku walbahaarin hadalkoodu cisi dhamaantiis Eebaa iska leh, waana Maqle oge.

وَلَا يَخْرُجُ مِنْهَا كَلِمَةٌ إِلَّا فِي كِتَابٍ مَّا بَدَّلُوا أَمْثَلًا وَلَا يَسْتَعِينُونَ ﴿٦٥﴾

Wax kasta oo la Fali iyo haddii Quraan la akhriin Eebe waa ogyahay marka la dhex geli, wax Eebe kaga qarsoomi cirka iyo Dhulkana ma jiro, ama ha u yaraado sida Darrada ama ha ka sii yaraado ama ha ka waynaado illeen wax kasta Kitaab cad bay ku suganyihiin, Awliyada ilaahayna cabsi iyo Walbahaar ma arkaan Aakhiro, waase kuwee? waa kuwa Eebe rumeeay ee ka Dhawrsada xummaanta, waxayna heli bishaaro Aduun iyo Aakhiraba, wax hadalka Eebe baddalina ma jiro, taasina waa liibaanta wayn. Waxaana kuu muuqda tilmaanta Awliyada Eebe oo ah kuwa Xaqa si dhaba u rumeeay, raacana Quraanka iyo sunnada Nabiga (naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) si dhabana ugu toosnaada Diinta iyo waxay fari, Ciddiise aan tilmaantaas ku sifoobin ma aha wali Eebe lagumana sheegi karo, waxaase lagu garan Diinta dhab ma u raacay.

Bishaarada adduunka wuxuu, Nabigu ku fasiray riyada fiican oo ruux arko ama loo arko, Aakhirana waa Jannada, waana kuwaas kuwaan cabsanaynin marka dadku cabsado oon murugoonayn marka dadku murugoodo, waana kuwa dar Eebe isu jeclaado iyagoon Qaraabo isku xidhyan xoolana isaasiin, waase in Xaqa lagu dadaalo. Yuunus (61-65).

66. Eebaa iska leh waxa samooyinka iyo Dhulka ku sugan, maxay raacayaan kuwa Alla Sokadii Shurako Caabudaya? waxaan mala ahayna ma raacayaan, waxaan beenaalayaal ahayna ma aha.

الْآيَاتِ لِلَّهِ مِنَ فِي السَّمَوَاتِ وَمِنَ فِي الْأَرْضِ
وَمَا يَتَّبِعُ الَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ
شُرَكَاءَ إِنْ يَسْمَعُونَ إِلَّا الْقُلُوبَ وَإِن هُمْ إِلَّا
يَخْرُصُونَ ﴿٦٦﴾

67. Eebe waa kan idiin yeelay Habeenka inaad xasishaan, malintana tu dhexdeeda wax Lugu Arko (Ka yeelay), arrintaasna waxaa ugu sugan calaamooyin qoomkii wax maqli.

هُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمْ آيَاتٍ لِيَسْمَعُوا فِيهَا
وَأَلْتَهَارَ مُبْصِرًا إِن فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ
يَسْمَعُونَ ﴿٦٧﴾

68. waxay dhehehen wuxuu yeeshay Eebe Ilmo, waa nasahanyahay, Eebana waa uun Hodan, wuxuuna leeyahay waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, agtiinna xujo uma taal waxaas (Beenta) mise Eebaad ku sheegayaan waxaydaan ogayn.

قَالُوا اتَّخَذَ اللَّهُ وَلَدًا سُبْحَانَ اللَّهِ هُوَ الْعَزِيزُ
لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ إِن
عِنْدَكُمْ مِنْ سُلْطَانٍ بِهَذَا أَتَقُولُونَ عَلَى
اللَّهِ مَا لَا تَعْمَلُونَ ﴿٦٨﴾

69. waxaad dhahdaa kuwa Eebe ku abuurta beenta ma liibaanaan.

قُلْ إِنَّا الَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ
لَا يُفْلِحُونَ ﴿٦٩﴾

70. waa uun raaxada adduunyo markaas xaggannagaa noqoshadoodu noqon, markaasaan Dhadhansiinaynaa cadaab daran gaalnimadooda darteed.

مَتَّعْنَا فِي الدُّنْيَا مِمَّا أَحْبَبْنَا ثُمَّ جَعَلْنَا لَهُمْ
عَذَابَ الشَّدِيدِ بِمَا كَفَرُوا ﴿٧٠﴾

Eebaa leh Cirka iyo dhulka iyo Khalqigoo dhan, Gaalana wax dhaba ma caabudayaan ee waxay ku socdaan malo iyo been, iyago diiddan Eebaha habeenka xasil ka yeelay, Maalintiina Iftiin iyo waqti wax arag, waana arrin Mudan in lagu waano qaato ciddii wax maqli. Beenbayna illeen sheegeen iyagoo ku sheegi Eebe Ilmo isagoo ka nasahan, khalqigoo dhan yuu leeyahaye, wax xujo ahna ma hayaan, waxayna Eebe ku sheegi waxayna ogayn, ciddii Eebe ku been abuuratana ma liibaanto, waa muddo yar nolosha adduun, waxaana loo celin Eebe wuxuuna dhadhansiin cadaab daran Gaalnimadooda darteed, taasina waa ciqaabta Gaalada xaqa diida. Yuunus (66-70).

71. ku akhri korkooda warkii Nabi Nuux markuu ku yidhi qoomkiisii: qoomkayow hadday idin la waynaatay Nagaadigayga iyo ku waanintayda aayaadka Eebe waxaan tala saartay Eebe ee kulmiya amarkiinna iyo shura-kadiinna yuuna ahaan amarkiinna wax qarsoon (oo dhiba) markaas i xukuma hana i sugina.

* وَأَتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ نُوحٍ إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ يَتَقَوْمِ
كَانَ كَثِيرًا عَلَيْهِمْ مَقَامِي وَتَذَكَّرِي بِبَابِكَ اللَّهُ
فَعَلَى اللَّهِ تَوَكَّلْتُ فَأَجْمَعُوا أَمْرَهُمْ شُرَكَاءَ كُفْرًا
ثُمَّ لَا يَكُنْ أَمْرُهُمْ عَلَيْهِمْ عِزَّةٌ ذُرُّهُمُ الْقَصَافُ إِلَى
وَلَا تَنْظُرُونَ ﴿٧١﴾

72. haddaad jeedsataan idin warsan-maayo ujuuro, ujuuradayda waxaa isiin Eebe, waxaana lay faray inaan ka mid ahaado Muslimiinta.

فَإِنْ تَوَلَّيْتُمْ فَمَا سَاءَ لَكُمْ مِنْ أَجْرٍ إِنَّ أَجْرِي إِلَّا عَلَى
اللَّهِ وَأُمِرْتُ أَنْ أكونَ مِنَ الْمُسْلِمِينَ ﴿٧٢﴾

73. wayna beeniyeen waxaana ku korinnay Nabi Nuux iyo intii la jirtay Doontii, waxaana ka yeelay kuwo u hadha dhulka, waxaana maanshaynay kuwii beeniyey Aayaadkannaga ee day siday noqotay cidhibtii kuwii loo digay.

فَكَذَّبُوهُ فَتَبَّعْنَاهُ مِنْ مَعْرِفَةِ الْغُلُوكِ وَجَعَلْنَاهُمْ
خَلَائِفَ وَأَعْرَفْنَا الَّذِينَ كَذَّبُوا بِبَابِنَا فَأَنْظُرْ كَيْفَ كَانَ
عَاقِبَةُ الْمُنذَرِينَ ﴿٧٣﴾

Qisada Nabi Nuux iyo nabiyu kale oo badanba wax badan bay ku soo aroortay Quraanka, meelo badanna lagu sheegay waxaana habboon in lagu waano qaato illeen wuxuu Eebe u soo celceliyey in lagu waano qaato, lagana leexo jidkoodii iyo Camalkii Xumaa, waxayna noqotay cidhibtii qoomkii Nabi Nuux khasaare, halaag iyo jab, markay khilaafeen amarkii Eebe Beeniyeen Nabi Nuux, waana sidaas Abaalka xaqdiidayaasha ka madax adayga wanaagga, xumaantana ku madax taaga, Ciddii Eebe ku kalsoonaata, rumaaysa, xaqa ku socota, wanaaggana fasha cid wax yeeli karta oon Eebe ahayn ma jirto, illeen ciddii Eebe talasaarata wuu ku filanyahaye. Yuunus (71-73).

74. markaas kadib waxaan u Bixinnay Rasuullo Qoomkoodii Waxayna ula yimaadeen xujooyin, mana Rumayn beenintoodii darteed ee horraysay, Saa-saan u Daabacnaa «daboollaa» Qu-luubta xadgudbayaasha.

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنْ بَعْدِهِ رَسُولًا إِلَى قَوْمِهِمْ فَجَاءَهُمْ
بِالْبَيِّنَاتِ فَمَا كَانُوا لِلرُّسُلِ مَعْلُومًا كَذَّبُوا بِهِ مِنْ قَبْلُ
كَذَلِكَ نَطْعُ عَلَى قُلُوبِ الْمُعْتَدِينَ ﴿٧٤﴾

75. markaasaan u Bixinay gadaashood (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Haaruun fircoon iyo colkiisii iyagoo Wata aayaadkannagii, wayna Isla waynaadeen waxayna Noqdeen Qoom dambii-layaal ah.

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنْ بَعْدِهِمُ مُوسَى وَهَارُونَ إِلَى قَوْمِهِمْ
وَمَلَّا بِهِمْ بِبَابِنَا فَاسْتَكْبَرُوا وَكَانُوا قَوْمًا
مُجْرِمِينَ ﴿٧٥﴾

76. markuu uga yimid Xaqu Xaggan-naga waxay Dhaheen kani waa sixir cad.

فَلَمَّا جَاءَهُمُ الْحَقُّ مِنْ عِنْدِنَا قَالُوا إِنَّ هَذَا لَيْسَ سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧٦﴾

77. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse ma waxaad ku Dhahaysaan Xaqa markuu idiin yimid ma Sixirbaa kani? isagoosan Liibaanin saaxiriintu.

قَالَ مُوسَىٰ أَتَقُولُونَ الْحَقُّ لَمَّا جَاءَكُمْ أَسِحْرٌ هَذَا وَلَا يُفْلِحُ السَّحْرُونَ ﴿٧٧﴾

78. Waxayna dhaheen ma waxaad noogu timid inaad naga leexisid waxaan ka hellay Aabayaalkanno oy idiin Ahaato waynaanta Dhulka (xukunka) annagu idinka idin Rumaynayno.

قَالُوا أَجِئْنَا بِتِلْكَ آيَاتِنَا وَعَمَّا وَجَدْنَا عَلَيْهِ آيَاتِنَا وَتَكُونُ لَكُمْ آلِكِبْرَاءٌ فِي الْأَرْضِ وَمَا نَحْنُ لَكُمْ بِمُؤْمِنِينَ ﴿٧٨﴾

Aayadahanna waxay ka warrami Rasuulladu diray Eebe iyo qisadii Nabi Muuse iyo Haaruun iyo wixii dhex maray Fircoon iyo Qoomkiisii iyo Nabiyadaas, markay is Kibriyeen ahaadeenna Danbiilayaal, kuna sheegeen Xaqii sixir, Nabi Muusana u sheegay in ciddii Xaqa sixir ku sheegta ayan liibaanaynin, markaasay tuhmaysteen iyagoo Sheegi inuu dooni Nabi Muuse inuu ka leexiyo waxay Aabayaalkood ka helen oo markaas u ahaato Sharafta iyo awooddu Nabi muuse iyo Qoomkiisa, waxayna Caddeeyeen inayan marna rumaynayn, taasina waa Caadada iyo Dabecadda Gaalada iyo xaqdiidayaasha oo ku sheega Xaqsheegayaasha Xumaan iyo awood ujeed iyo ceebo ayna lahayn, Xaqaase guushu ku danbayn. Yuunus (74-78).

79. wuxuu yidhi fircoon: ii keena saaxir cilmi badan oo dhan.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ أَتَأْتُونِي بِكُلِّ سِحْرِ عَلِيمٍ ﴿٧٩﴾

80. markay yimaadeen saaxiriintiina wuxuu ku yidhi (Nabi) Muuse: Tuura waxaad Tuuraysaan.

فَلَمَّا جَاءَ السَّحْرُ قَالَ لَهُمْ مُوسَىٰ الْقَوْمَا مَا أَنْتُمْ مُتْلِفُونَ ﴿٨٠﴾

81. markay tuureenna wuxuu yidhi (Nabi) Muuse: sixir baad la timaaddeen Eebaana Burin, Eebana ma hagaajiyo camalka fasaadiyayaasha.

فَلَمَّا أَلْقَوْا قَالَ مُوسَىٰ مَا جِئْتُمْ بِهِ السِّحْرَانِ اللَّهُ سَيُطِيلُهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يُضِلُّ عَمَلَ الْمُفْسِدِينَ ﴿٨١﴾

82. wuxuuna ku sugaa Eebe xaqa kalimadiisa haba naceen Dambiilayaas-huye.

وَيُخَيِّطُ اللَّهُ الْحَقَّ بِكَلِمَاتِهِ وَلَوْ كَرِهَ الْمُجْرِمُونَ ﴿٨٢﴾

83. ma rumaynin Nabi Muuse Farac yar oo Qoomkiisii ka mida mooyee iyagoo ka Cabsan fircoon iyo Kooxdii-sii inay fidmeeyaan, fircoonna wuu isku

فَمَاءٌ آمِنٌ وَالْمُوسَىٰ الْأَذْرَىٰ إِنَّ قَوْمَهُ عَلَىٰ خَوْفٍ مِّنْ فِرْعَوْنَ وَمَلَئِهِمْ أَنْ يَفْتِنَهُمْ وَإِنَّ فِرْعَوْنَ

kibriyey dhulka wuxuuna ka mid ahaa xadgudbayaaha.

لَعَالٍ فِي الْأَرْضِ وَإِنَّ مِنْ الْمُعْسِرِينَ ﴿٨٢﴾

Saasuuna Fircoon isula waynaaday una codsaday in loo soo kulmiyo Ciddii sixirka taqaan, markaasay yimaaddeen waxaana dhexmaray isaga iyo Nabi Muuse arrimihii wax badan quraanku ka warramay oo ah in guushii Nabi Muuse raacday Saaxiriintiina Islaameen oo xaqa raaceen, Eebana tirtiray sixirkii illeen dhagarlow ma liibaanee, xaqiina wuu sugay haba naceen dambilayaashuye, Nabi Muusana markaas waxaa rumeeyey dad yar oo Fircoon ka cabsan illeen Fircoon wuxuu ahaa Nin isla wayn oo xad gudba, maxaase u dambeeyey isaga iyo Colkiisii Kibray waxaa ka wa warrami aayadaha soo socda. Yuunus (79-83).

84. wuxuu yidhi (Nabi) Muuse: Qoom-kayow haddaad tihiin kuwa rumeeyey Eebe isaga uun tala saarta haddaad Muslimiin Tihiin.

وَقَالَ مُوسَىٰ يَتَقَوْمِ إِن كُنتُمْ آمَنْتُمْ بِاللَّهِ فَعَلَيْهِ تَوَكَّلُوا إِن كُنتُمْ مُسْلِمِينَ ﴿٨٣﴾

85. waxayna dheheen: Ilaahay yaan talo saarannay, Eebahannow hanooga yee-linna fidmo Qoomka Daalimiinta ah.

فَقَالُوا أَعْلَىٰ اللَّهُ تَوَكَّلْنَا رَبَّنَا لَا تَجْعَلْنَا فِتْنَةً لِّلْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٨٤﴾

86. nagana kori naxariistaada darteed qoomka gaalada ah.

وَتَجَنَّبْ رَحْمَتِكَ مِنَ الْقَوْمِ الْكَافِرِينَ ﴿٨٥﴾

87. waxaana u waxyoonnay (Nabi) Muuse iyo walaalkiis inaad uga yeeshaan Qoomkiinna Masar Guryo kana yeesha guryihiinna Qiblada (Ku tuka-da) ooga salaadda una bishaaree Mu' miniinta.

وَأَوْحَيْنَا إِلَىٰ مُوسَىٰ وَأَخِيهِ أَن تَبَوَّءَا لِقَوْمِكُمَا بِمِصْرَ يُبْرَا وَأَجْعَلُوا يُبْرَا قِبْلَةً وَاقِيمُوا الصَّلَاةَ وَبَشِّرِ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٦﴾

88. wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse: Eebahannow adaa siiyey Fircoon iyo Kooxdiisa Qurux iyo Xoolo Nolosha adduunka Eebow inay ka dhumiyaan Jidkaaga, Eebow halaag (Tirtir) Xoola-hooda Adkeena Quluubtooda oo yeyna rumeynin intay ka arkaan Cadaab daran.

وَقَالَ مُوسَىٰ رَبَّنَا إِنَّكَ آتَيْتَ فِرْعَوْنَ وَمَلَئَهُ زِينَةً وَأَمْوَالًا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا رَبَّنَا لِيُضِلُّوهُ عَنْ سَبِيلِكَ رَبَّنَا اطْمِسْ عَنَّا أَمْوَالَهُمْ وَأَسْدُدْ عَلَيْنَا فُلُوبَهُمْ فَلَا يُؤْتُوا حَتَّىٰ تَرَوْا الْعَذَابَ الْأَلِيمَ ﴿٨٧﴾

89. Eebe wuxuu yidhi waa la ajiibay Baryadiinna ee toosnaada hana raacina Jidka kuwaan wax ogayn.

قَالَ قَدْ أُجِيبَتِ دَعْوَتُكُمَا فَاسْتَقِيمَا وَلَا تَتَّبِعَانَّ سَبِيلَ الَّذِينَ لَا يَتَّقُونَ ﴿٨٨﴾

Nabi Muuse Qoomkiisii yuu u dardaarmay inay Eebe talo saartaan waxayna Eebe warsadeen Wanaag iyo Naxariis, Eebana wuxuu faray Nabi Muuse iyo Haaruun inay Dadka Masar dajiyaan, guryahana ku tukadaan, Salaaddana oogaan, una Bishaareeyaan Mu'miniinta, Nabi Muusana wuxuu habaaray Fircoon iyo Qoomkiisii Eebana waa ka aqbalay Baryadii, wuxuuna faray Toosnaan iyo inayna raacin Jidka Jaahiliinta, Taasina waxay ku tusin in wanaagga iyo jidka toosan lagu socdo oon la leexanin. Yuunus (84-89).

90. waxaan tallaabinay Banii Israa'iil Badda waxayna u raaceen Fircoon iyo Qoomkiisii kibir iyo cadaawanimu, markay haleeshay maansheyntiina wuxuu yidhi (Ficoon): waxaan rumeeyey inaan Eebahay rumeeyeen Banii Israa'iil mooyee ku cibaada mutay oo kale jirin, waxaana ka mid ahay Muslimiinta.

* وَجَوْرَ نَاصِيَةِ إِسْرَائِيلَ الْبَحْرَ فَأَتْبَعَهُمْ فِرْعَوْنُ
وَجَوْرُهُمْ بِغَيْرِ عَدْوٍ وَحَتَّىٰ إِذَا أَدْرَكَهُ الْعَرْفِيُّ
قَالَ ءَأَمِنْتُ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا الَّذِي ءَأَمِنْتُ بِهِ يَوْمَ
إِسْرَائِيلَ وَأَنَا مِنَ الْمُسْلِمِينَ ﴿٤٠﴾

91. (Eebe wuxuu yidhi): hadda (Miyaad rumeyn) adoo horay u caasiyey oodna ka mid ahayd kuwa wax fasaadiya.

ءَأَلَّنَ وَقَدْ عَصَيْتَ قَبْلَ وَكُنْتَ
مِنَ الْمُفْسِدِينَ ﴿٤١﴾

92. Maanta waxaannu korin badankaa-ga inaad u noqotid Cidda kaa dambay-sa Calaamo, wax badan oo Dadka ka mida Aayaadkannaga waa halmaansan yihiin.

قَالُوا مَوْجٌ نُّعْجِبُكَ بِدِينِكَ لِتَكُونَ لِمَنْ خَلَقَكَ
ءَايَةً وَإِنَّ كَثِيرًا مِّنَ النَّاسِ عَنْ ءَايَاتِنَا
لَتَنفُلُونَ ﴿٤٢﴾

93. waxaan dejinnay Banii Israa'iil Dejin runa (meel fiican) waxaana ku arsaaqnay wanaag, waxayna is khilaa-feen markuu cilmigu u yimid, Eebahaana wuu kala xukumi maalinta Qiyaame waxay isku khilaafeen.

وَلَقَدْ بَوَّأْنَا بَنِي إِسْرَائِيلَ مَبُورًا صِدْقٍ وَرَزَقْنَاهُمْ
مِّنَ الطَّيِّبَاتِ فَمَا اخْتَلَفُوا حَتَّىٰ جَاءَهُمُ الْعِلْمُونَ
رَبِّكَ يَقْضِي بَيْنَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فِيمَا كَانُوا فِيهِ
يَخْتَلِفُونَ ﴿٤٣﴾

Halkan wuxuu Eebe ku caddayn siduu u maansheeyey Fircoon iyo Colkiisii, waxaana dhacay in markii Banii Israa'iil gudbeen, Fircoon iyo Dadkiisina Biyaha Badda ku dhex jiraan Eebe waxay Maansheeyey siday Aayado kale Caddeyeen, markaasna uu Dambile Fircoon isku dayey inuu Eebe qiro, maxaase laga aqbali markaas oo kale, mar hadduu ahaa dulmi badane, Col ah, Caasi ah, oo Mufsid ah, waxaase Eebe koriyey Badankiisii si ciddii ka dambaysa ay calaamad Xaqnimada Eebe ugu noqoto oyna u halmaamin, markaasaa Eebe dejiyey Banii Issar'ii meel roon kuna Arsuqay wanaag, waxay isku khilaafaanna Eebaa kala xukumi Qiyaamada, Saasuuna xaqii u guulaystay Baadilikii iyo Kibirkiina u jabeen una halaagsameen. Yuunus (90-93).

94. haddaad ka Shakisantahay waxaan kugu soo Dejinnay warso kuwa Akh-riya Kitaabka hortaa, waxaa kaaga yimid xagga Eebe, Xaq, ee ha Noqon-nin kuwa Shakiya.

فَإِنْ كُنْتَ فِي سَكِّهِ وَمَا أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ فَسَّالِ الَّذِينَ
يَقْرَءُونَ الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِكَ لَقَدْ جَاءَكَ الْحَقُّ مِنْ
رَبِّكَ فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ الْمُمْتَرِينَ ﴿٤٤﴾

95. hana ka mid noqon kuwa beeniya Aayaadka Eebe ood ka mid noqoto kuwa Khasaaray.

وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ الَّذِينَ كَذَبُوا عِبَادَتِ اللَّهِ فَتَكُونَنَّ مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٩٥﴾

96. kuway ku waajibtay Kalimaddii Eebahaa (Ciqaab) rumeyn maayaan.

إِنَّ الَّذِينَ حَقَّتْ عَلَيْهِمْ كَلِمَاتُ رَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٩٦﴾

97. xataa haddaad ula timaaddid Aayad kasta, intay ka arkaan Cadaab Daran.

وَلَوْ جَاءَتْهُمْ كُلُّ آيَةٍ حَتَّىٰ يَرَوْا الْعَذَابَ الْأَلِيمَ ﴿٩٧﴾

98. maxay u jiriwayday Magaalo rumeysa (Xaqa) oo uu anfaco Iimaankeedu, laakiin qoomkii (Nabi) Yuunus markay rumeeyeen waxaan ka faydnay Cadaabkii dulliga ee Adduunka, waxaana u raaxaynay tan iyo Muddo.

فَلَوْلَا كُنْتُمْ قَوْمًا آمَنْتُمْ فَفَعَلْنَا بِمَنْهَا إِلَّا آيَاتٍ قَوْمٌ يُّؤَسُّسُ لِمَاءٍ آمَنُوا كَسَفَعْنَا عَنْهُمْ غَلَابَ الْخَيْرِ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَمَتَّعْنَاهُمْ إِلَىٰ حِينٍ ﴿٩٨﴾

99. hadduu doono Eebahaa waxaa rumayn lahaa waxa Dhulka ku sugan oo dhan, ee ma adaa Dadka ku qasbi intay ka rumeeyaan (Xaqa).

وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ لَأَمَنَّ مِنَ فِي الْأَرْضِ كُلَّهُمْ جَمِيعًا أَفَأَنْتُمْ تُكْفِرُهُ النَّاسَ حَتَّىٰ يَكُونُوا مُؤْمِنِينَ ﴿٩٩﴾

100. nafuna ma rumeysid idanka Eebe ka dib mooyee, wuxuuna Eebe yeelaa xumaanta kuwaan wax kasayn korkooda.

وَمَا كَانَ لِنَفْسٍ أَنْ تُوَمِّنَ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ وَجَعَلَ الْبَيْتَ عَلَىٰ الَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٠٠﴾

Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka ma shakinnin waxa lagu soo dejin, ee waxaa diidi Dadka, mana aha in cidna Shaki ka galo Xaqa, Ciddiise Eebe u qoray Ciqaab iyo rumeyn la'aan ma rumeysid intay Ciqaab daran ka arkaan, waxaana ku habboon inay Magaalo kastaba Dadkeedu Xaqa rumeeyo, waxaana Eebe ka toobad aqbalay Qoomkii Nabi Yuunus markay rumeeyeen, waxayna ku noolaadeen Adduunka tan iyo Muddo, hanuunkana Eebaa hanta, hadduu doonana waxaa xaqa rumeyn waxa Dhulka ku nool oo dhan, mase aha in Dadka lagu Qasbo Rumeynta, Nafuna ma rumeysid idanka Eebe la'aantiis, xumaanna waxaa mudan kuwaan kasayn, Taasina waxay ku tusin Xaqa iyo Wanaagga, lana shakiyay Xaqa lana warsado Eebe ku sugidda Xaqa, had iyo jeerna Eebe lagu xidhnaado lana warsado hanuun, Khayr iyo Sugnaan, illeen Eebaa awoodda iska leh, wax kastana Awooddiisa ku jiraan, waase in si dhaba loogu Dhaqmo Xaqa. Yuunus (94-100).

101. waxaad dhahdaa daya waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka waxna kama deeqaan Aayado (Calaamooyin) iyo Digid qoom aan rumeyn (Xaqa).

قُلْ أَنْظَرُوا مَاذَا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا تُعْبَدُونَ إِلَّا آيَاتُ اللَّهِ وَتَلْمِذُونَ الْقَوْمِ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٠١﴾

102. ma waxay sugi waxaan ahayn Ayaamihii kuwii tagay hortood oo kale, waxaad dhahdaa suga anna waan idinla sugiye.

فَهَلْ يَنْتَظِرُونَ إِلَّا مِثْلَ آيَاتِ الَّذِينَ خَلَوْا مِنْ قَبْلِهِمْ قُلْ فَانْتَظِرُوا إِنِّي مَعَكُمْ مِنَ الْمُنْتَظِرِينَ ﴿١٠٢﴾

103. markaasaan korinnaa Rasuullada iyo kuwa rumeeyey saasaana Xaq nagu ah, inaan u korinno Mu'miniinta.

ثُمَّ نُنَجِّي رُسُلَنَا وَالَّذِينَ آمَنُوا كَذَلِكَ حَقًّا عَلَيْنَا نُنَجِّ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٣﴾

104. waxaad dhahdaa Dadow haddaad tihiin kuwo shakisan diintayda Caabudi maayo waxaad caabudaysaan oo Eebe ka soo hadhay, waxaanse Caabudi Eebaha idin Dili, waxaana lay faray inaan ka mid noqdo Mu'miniinta.

قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِن كُنْتُمْ فِي سَكِّ مِنْ دِينِي فَلَا أَعْبُدُ الَّذِينَ تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلَكِنْ أَعْبُدُ اللَّهَ الَّذِي يَتَوَقَّعُكُمْ وَأُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٤﴾

105. iyo inaan u jeediyo wajjiga Diinta anoo Toosan hana ka mid noqonin Mushrikiinta.

وَأَنْ أَقْرِبَ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا وَلَا تَكُونَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿١٥﴾

Dadku waa inay ku waano qaataan calaamooyinka Cirka iyo Dhulka, waxayse waanadu wax u tartaa kuwa Xaqa rumeeya, kuwaan Xaqa Rumeysne wax uma tarto, ciddii Xaqa ka jeedsataa ha sugto wixii ku dhacay Gaaladii ka horreeyey oo ciqaaba.

Wuxuuna Eebe koriyaa kuwa Xaqa rumeeya, Diinta Islaamkana Shaki ma leh, waana in laga fogaado cibaadada wax Eebe ka soo hadhay, illeen waxaa Cibaado mudan Ilaaha, Dadka oofsan, farayna in Mu'miniinta laga mid noqdo, Wajigana loo jeediyo xagga Eebe, lagana fogaado jidka Gaalada. Aayaduhuna wuxuu warkoodu ku koobanyahay in Abuurka Eebe lagu waano qaato, si dhaba loo caabudo, Jidka xun ee baadida ahna laga dheeraado. Yuunus (101-105).

106. Hana caabbudin Eebe ka Sokow waxaan wax ku Tarayn kuna dhibayn, Haddaad fasho waxaad ka mid Noqon Daalimiinta.

وَلَا تَدْعُ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَنْفَعُكَ وَلَا يَضُرُّكَ فَإِن فَعَلْتَ فَإِنَّكَ إِذًا مِنَ الظَّالِمِينَ ﴿١٦﴾

107. Hadduu ku taabsiiyo Eebe dhib wax faydi kara oon isaga Ahayn ma jiro, Hadduu kula doono Khayrna wax celin kara fadligiisa ma jiro, Wuxuuna gaadhsiiyaa cidduu doono oo Addoomadiisa ka mida, waana Dambi dhaafe Naxariista.

وَإِن يَعْصِ سَكَ اللَّهُ يَضُرَّ فَلَا كَاشِفَ لَهُ إِلَّا هُوَ وَإِن يُرِدْكَ بِخَيْرٍ فَلَا رَادَّ لِفَضْلِهِ يُصِيبُ بِهِ مَن يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ وَهُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ ﴿١٧﴾

108. Waxaad dhahdaa Dadow waxaa idiinka yimid xagga Eebe Xaqii, ciddii Hanuuntana wuxuu uun u Hanuunay Naftiisa, cidii dhuntana wuxuu uun u Dhumay Naftiisa (Dhibkeeda), Anna korkiinna Wakiil uma ihi.

قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَكُمْ الْحَقُّ مِنْ رَبِّكُمْ فَمَن آهْتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهْتَدِي لِنَفْسِهِ وَمَن ضَلَّ فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيْهَا وَمَا أَنَا عَلَيْكُمْ بِوَكِيلٍ ﴿١٨﴾

109. Ee raac waxa lagu waxyooday,
Samirna inta Eebe ka kala Xukmin
(Dadka) isagaa u Wanaagsan Xaakime.

وَاتَّبِعْ مَا وَحَىٰ إِلَيْكَ وَأَصْبِرْ حَتَّىٰ يَخْرُجَ إِلَيْكَ
وَهُوَ خَيْرُ الْحَاكِمِينَ ﴿١٠٩﴾

Waxna ha ka dayin hana caabudin waxaan waxba kuu tarayn, Ciddii saas fashana Waxay ka mid noqon Daalimiinta, hadduu Eebe Dhib kula doono wax faydi oon isaga ahayn ma jiro, Hadduu khayr kula doonana wax celin kara Fadligiisa ma jiro, Cidduu doono yuuna siiyaa Naxariis, waana danbi dhaafe Naxariista. Dadkana xaqbaa u yimid ciddii ku hanuuntana wuxuu wax u taray Naftiisa, ciddii Dhuntana wuxuu uun dhibay Naftiisa, Nabiguna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Cidna ilaaliye uma aha, wuxuuna Eebe faray Nabiga iyo dadka kalaba inay raacaan Xaqa Eebe u waxyooday nabiga, adkaystaanna inta Eebe ka kala Xukmin, illeen Eebaa xukunkiisu Caadilyahaye, Suuradduna waxay ku dhammaatay in Xaqa lagu fara adkaado lana raaco, laguna samro oo loo adkaysto arrintaas. Yuunus (106-109)



Suurat Huud

سورة هود
سورة هود

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Erayga hore wuxuu ku Tusin Mucjisada Quraanka, Kitaabka Quraanka ahna waa mid la sugay Aayadihiisa, markaas lagana Caddeeyey Eebaha Falka san ee wax walba og Xaggiisa.

الرَّكِبِ أَحْكَمَتْ أَيْتُهُ وَنُفِصَلَتْ مِنْ لَدُنْ حَكِيمٍ خَبِيرٍ ﴿١﴾

2. inaydaan Caabudin Eebe mooyee wax kale, anugu waxaan idiinka ahay xagga Eebe Dige Bishaareeya.

الَّذِينَ عِبَدُوا إِلَّا اللَّهَ إِنْ لَمْ يَنْذِرْ وَيَنْذِرِ ﴿٢﴾

3. dambi dhaafna warsada Eebe una toobad keena wuxuu idiinku raaxayn nolol wanaagsan tan iyo muddo, wuxuuna siin cid kasta oo dheeraad leh (Fadli) dheeraadkiisa (Fadligiisa) had-daad jeedsataanna anugu waxaan idiinka cabsan Cadaab Maalin wayn.

وَأَنْ أَسْتَغْفِرُوا رَبَّهُمْ نُوَلِّوْا إِلَيْهِ يَتَّبِعِكُمْ مَتَمَّ حَسَنًا إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى وَيُؤْتِ كُلَّ ذِي فَضْلٍ فَضْلَهُ ۗ وَإِنْ تَوَلَّوْا فَإِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ كَبِيرٍ ﴿٣﴾

4. xagga Eebaa noqoshadiinnu tahay, wax kastana wuu karaa.

إِلَىٰ اللَّهِ مَرْجِعُكُمْ وَهُوَ عَلِيمٌ بِذُنُوبِكُمْ قَدِيرٌ ﴿٤﴾

Suuraddani waa Suurad wax badan ka warrantay, waxaana dhacday in Nabigii (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) lagu yidhi: waxaan kugu aragnaa cirro, markaasuu yidhi waxaa i cirraysay Huud iyo Walaalaheed, Quraankuna waa wax sugan oo cad oo xaggaa Eebe ka soo Degay, farina inaan Eebe mooyee wax kale la Caabudin, Nabiguna waa Dige Bishaareeya, waana in Eebe loo toobad keeno dambi dhaafna la warsado. Huud (1-4).

5. waxay iilayaan Laabtooda inay iska qariyaan Eebe, markay isku dadi maryahooda waa ogyahay Eebe waxay qarsan iyo waxay Muujin, illeen Eebe waa ogyahay waxa laabta ku sugane.

إِلَّا إِلَهُهُمْ يَدْعُونَ صُدُورَهُمْ لَيَسَّخَرْنَاهُمْ مِنْهُ وَلَا جِئِينَ لَيَمْسَخُنَّ مِنْهَا أَعْيُنُهُمْ يَلْعَوْنَ مَا يُبْصِرُونَ وَمَا يَعْلَمُونَ إِلَهَهُمْ عَلَيْهِمْ نَزَّادَانِ الصُّدُورِ ﴿٥﴾

6. Dhul socod kasta Risqigeedu wuxuu saaranyahay Eebe wuxuuna ogyahay meeshey ku Hoyan ooy u dheelman, dhammaanna Kitaab Cad yey ku sugan yihiin.

* وَمَا مِنْ دَابَّةٍ فِي الْأَرْضِ إِلَّا عَلَيَّ اللَّهُ رِزْقُهَا
وَيَعْلَمُ مُسْتَقَرَّهَا وَمُسْتَوْدَعَهَا كُلٌّ فِي
كِتَابٍ مُبِينٍ ﴿٦﴾

7. Eebe waa kan ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Lix Maalmood, wuxuuna ahaa Carshigiisu Biyo korkood inuu idin Imtixaamo kiinna Camalka Wanaagsan, haddaad dhahdo waa laydin soo bixin Geeri ka dib waxay odhan kuwii gaaloobay: kani waxaan sixir Cad ahayn ma aha.

وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ
أَيَّامٍ وَكَانَ عَرْشُهُ عَلَى الْمَاءِ لِيَبْلُوكُمْ
أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا وَلَئِنْ قُلْتُمْ إِنَّكُمْ مَعْرُوفُونَ
مِنْ بَعْدِ الْمَوْتِ لَيَقُولَنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا إِنْ هَذَا
إِلَّا إِسْحَارٌ مُبِينٌ ﴿٧﴾

Gaaladii wax kasta oo xaqdiida ah way sameeyeen xataa waxay isku dadeen maryo si ayna u maqlin xaqa ama u arkin Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee) Eebase waa ogyahay waxay qarsan iyo waxay Muujisan, illeen waxa qalbiga ku jiruu ogyahay.

Wax kasta oo dhulka ku Noolla Eebaa Cunnadeeda Ballan qaaday ogna Meeshay ku sugantahay iyo meeshay ku Hoyan, wax kastana wuxuu ku suganyahay Kitaab Cad, Eebaana ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Lix Maalmood Carshigiisuna ahaa Biyaha korkooda inuu Imtixaamo Dadka kooda Camal fiican, hadduu nabigu Gaalada ku dhaho waa laydin soo bixin geeri ka dib waxay odhan kuwii gaaloobay: kani waa sixir Cad, Saasayna Xaqa u diidaan si Doqonimo iyo Madax adayg ah. Huud (5-7).

8. haddaan dib uga dhigno Cadaabka Xaggooda tan iyo muddo tirsan waxay odhan maxaa celinaya, maalintuuse u yimaaddo mid laga iilo ma aha, waxaana ku dhaca waxay ku jeesjeesi (Ci-qaabtiisii).

وَلَئِنْ أَخَّرْنَا عَنْهُمُ الْعَذَابَ إِلَىٰ أُمَّةٍ مَّعْدُودَةٍ
لَيَقُولَنَّ مَا كُنَّا فِي الْأَيَّامِ بِنَاهِمِهِمْ لَيْسَ
مَصْرُوفًا عَنْهُمْ وَحَاقَ بِهِمْ مَا كَانُوا بِهٖ
يَسْتَهْزِئُونَ ﴿٨﴾

9. haddaan dhadhansiinno Dadka naxariis xaggannaga ah markaas aan ka qaadno wuxuu noqdaa mid quusasho badan oo dafir badan.

وَلَئِنْ أَدْرَأْنَا الْإِنْسَانَ مِمَّا رَحِمَهُ لَنُذَرِعَنَّ عَنْهَا مِثْلَهُ
إِنَّهُ لَيَكُونُ مِنْ كَفَّورٍ ﴿٩﴾

10. haddaan dhadhansiinno Dadka Nicmo dhib taabtay ka dib wuxuu dhihi: waxaa iga tagay xumaantii isagoo Farax iyo faan ku sugan.

وَلَئِنْ أَدْرَأْنَاهُ نِعْمَاءً بَعْدَ ضَرِّهِ مَسَّنَتْهُ
لَيَقُولَنَّ ذَهَبَ السَّيِّئَاتُ عَنِّي إِنَّهُ لَفَرِحٌ
فَخُورٌ ﴿١٠﴾

11. kuwa Samra ee camal fiican fala mooyee, kuwaasna waxaa u sugnaaday dambi dhaaf iyo ajir wayn.

إِلَّا الَّذِينَ صَبَرُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أُولَٰئِكَ
لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ كَبِيرٌ ﴿١١﴾

waxaa ka mida gaalada dabeecadooda in haddii ciqaabta dib looga dhiga ay dheerersadaan oy dhahaan maxaa reebaya, Maalintuuse cadaab u yimaaddo wax la leexin ma jiro, waxaana ku dhici waxay ku jees jeesayeen ciqaabtiisii, haddii dadka Eebe naxariis dhadhansiiyo markaas ka wareejiyo waxaa ka mida kuwo qusan oo Gaaloobi, haddii Nicmo la siiyo dhib ka dibna waxay dhahaan iyagoo faani oo kibri dhibkii waa tagay, kuwa xaqa rumeeyeeye oo Samra oo camal fiican fala iyagu kuma jiraan saasna ma aha, ee waxay ogyihiin in wax walba Awwoodda Eebe ku jiraan uuna dadka u Nicmeyn, uuna dhibi, inuu Imtixaamo ciddii rumeysa iyo tii diidda Xaqa, kuwa Samo Falase waxaa u sugnaaday oy heli dambi dhaaf iyo Ajir wayn. Huud (8-11).

12. waxaad u dhawdahay inaad ka tagto waxa lagu waxyoon qaarkiis oy la cidhiidhyanto Laabtaadu inay dhahaan maa lagu soo Dejiyo korkiisa Kansi ama la yimaaddo malag, adugu waxaad uun tahay Dige, Eebana wax kasta wuxuu u yahay (Ilaaliye) Wakiil.

فَلَمَّا تَرَكَ تَارِكٌ بَعْضَ مَا يُوحَىٰ إِلَيْكَ وَصَافِقًا بِهِ
صَدْرُكَ أَنْ يَقُولُوا لَوْلَا أُنزِلَ عَلَيْهِ كُتُبٌ أَوْ جَاءَ
مَعَهُ مَلَائِكَةٌ إِنَّمَا أَنْتَ نَذِيرٌ وَاللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ
وَكِيلٌ ﴿١٢﴾

13. mise waxay odhan wuu been abuur-
tay, waxaad dhahdaa keena Toban
Suuradood oo la mida oo la been
abuurtay una yeedha cidaad kartaan
oo Eebe ka soo hadhay haddaad run
sheegaysaan.

أَمْ يَقُولُونَ أَفَنَرَاهُ قُلُوبًا فَآتَانَا بِعَشْرِ سُوْرٍ مِّثْلِهِ
مُفْتَرِيَاتٍ وَأَدْعُوا مَن دُونِ اللَّهِ
إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿١٣﴾

14. haddayna idin Ajiibin «yeelin»
ogaada in lagu soo dejiyey Quraanka
ogaansho Eebe iyo inaan Alle mooyee
ku Xaq lugu caabudaa jirin, ee ma
islaamaysaan.

فَالَّذِي يَسْتَجِيبُوا لَكَ فَاعْلَمُوا إِنَّمَا أُنزِلَ بِعِلْمِ
اللَّهِ وَأَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ فَهَلْ أَنْتُمْ مُسْلِمُونَ ﴿١٤﴾

15. ciddii dooni nolosha adduunyo iyo
quruxdeeda waxaan u dhammaynaynaa
camalkooda dhexdeeda, lagamana nus-
qaamiyo.

مَنْ كَانَ يُرِيدُ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا وَزِينَتَهَا نُوفِّ إِلَيْهِمْ
أَعْمَالَهُمْ فِيهَا وَهُمْ فِيهَا لَا يُبْخَسُونَ ﴿١٥﴾

16. Kuwaasuna waa kuwaan ku lahayn
Aakhiro waxaan Naar ahayn, waxaana
buray waxay ku sameeyeen dhexdeeda,
waxaana baadhila (wax kama jire ah)
waxay falayeen.

أُولَٰئِكَ الَّذِينَ لَيْسَ لَهُمْ فِي الْآخِرَةِ إِلَّا النَّارُ
وَحَبِطَ مَا صَبَّوْا فِيهَا وَكِبَلٌ مَّا كَانُوا
يَعْمَلُونَ ﴿١٦﴾

Eebe wuxuu Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u soo Jeediyyey inuusan u aabo yeelin warka Gaalada iyo Madax Adaygooda, lana cidhiidhyamin waxay ka doonayaan oo ah Xoolo badan iyo Malaa'ig keenid, illeen shaqadiisu waa xaq gaadhsiine, Eebaase wax walba Ilaaliya hadduu

Nabigu Quraanka been abuurtay iyaba ha keenaan Toban suuradood oo la mida oo la been abuuray hana la kaashadeen cidday karaan hadday run sheegi, hadday yeeli waayaanna ha ogaadeen in Quraanku ku soo degey ogaanshaha Eebe iyo inaan Alle mooyee ku xaq lugu caabudaa jirin ee may islaamaan, ciddii doonta adduunyo iyo Quruxdeed waannu ka siin Camalkooda oon laga nusqaamineyn dhexdeeda, Aakharana kuwaasu wax kuma leh, wuuna buray waxay faleen, waxaana baadila camalkoodii, Ibnu Cabbas wuxuu yidhi: kuwa istustusa waxaa lagu siin wanaagooda Adduunka, Aakharana way Khasaari. Huud (12-16).

17. Ruux ku sugan (Xujo) cad oo Eebihis, uu raacina marag Eebe, hortiiisna ahaayeen Kitaabkii Muuse isagoo Imaam iyo Naxariis ah ma la midbaa mid adduunyo uun doonay, kuwaas fiican way rumeyn Quraanka, ciddii ka gaalowda Quraanka iyo Nabiga oo Xisbiyada ka mida Naarbaa ballan u ah, ee ha noqon mid Shakiya Xaggiisa, isagu waa Xaq Eebe ka ahaadaye, laakiin Dadka Badankiis ma Ru-meeyaan.

أَفَرَأَىٰ كَانَ عَلَىٰ بَيْتِهِ مِن رَّبِّهِ وَرَسُولُهُ شَاهِدًا مِّنْهُ
وَمَنْ قَبْلِهِ كَتَبَ مُوسَىٰ إِمَامًا وَرَحْمَةً أُولَٰئِكَ
يُؤْمِنُونَ بِهِ وَمَنْ يَكْفُرْ بِهِ مِنَ الْأَحْزَابِ قَالُوا
مَوْعِدُهُمْ فَلَا آتَاءَ فِي مِرْيَقَتِنَا إِنَّهُ الْحَقُّ مِن رَّبِّكَ
وَلَكِنَّا أَكْثَرُ النَّاسِ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٧﴾

18. yaa ka dulmi badan ruux ku abuurtay Eebe Been, kuwaas waxaa loo bandhigi Eebahood, waxayna odhan maraggu kuwaasu waa kuwa ku been abuurtay Eebahood, Lacnadi ha ahaato Daalimiinta korkooda.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أُولَٰئِكَ
يُعْرَضُونَ عَلَىٰ رَبِّهِمْ وَيَقُولُ الْأَشْهَادُ هَٰؤُلَاءِ
الَّذِينَ كَذَّبُوا عَلَىٰ رَبِّهِمْ آلَا لَعْنَةُ اللَّهِ عَلَى
الظَّالِمِينَ ﴿١٨﴾

19. ee ah kuwa ka jeedsada Jidka Eebe, lana dooni Qallooc, Aakharana ka gaalobay.

الَّذِينَ يَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ اللَّهِ وَيَبْغُونَهَا عِوَجًا
وَهُمْ بِالْآخِرِ هُمْ كَافِرُونَ ﴿١٩﴾

Mu'miniinta Xaalkoodu waa mid waafaqsan Abuurka Eebe ee ah Diinta, Siduu Rasuulku (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Yidhi: Cid kastoo la dhalo waxaa lagu dhaala Diinta Islaamka, ee Labada Waalid unbaa Yuhuud ka dhigta ama Nasaara ama Majuusi. (waxaa wariyey Buhkhaari iyo Muslim). Diinta dhabta ahna waa tan Islaamka, waxaana saa marag furay Nabiyadii Eebe oos ka mid ahaa Nabi Muuse, ciddii ka Gaalowda Quraanka ama Nabiga oo Dadka ka mida cidduu dooni ha noqdee Naarbaa ballan u ah, Quraankuna Shaki ma leh inuu xaq xagga Eebe ka yimid yahay, Dadka badankiisuse ma rumeeyaan, cid ka dulmi badanna ma jirto Ruux ku been abuurtay Eebe, kuwaasna waxaa loo bandhigi Eebahood, maragguuna wuxuu odhan oo ah Dadka Qiyaamada jooga kuwani waa kuwii ku Been abuurtay Eebahood Lacnadi ha ku dhacdo Daalimiinta Jidka Eebe ka leexisa Dadka oo Qalloocna la doonta Aakharana ka gaalooba. Dhabtii waa Aayado la yaable oo Waa weyn. Huud (17-19).

20. kuwaasu ma aha kuwa ku daalin Eebe Dhulka dhexdiisa umana sugna wax Eebe ka soo hadhay oo u gargaari

أُولَٰئِكَ لَمْ يَكُونُوا مُعْجِزِينَ فِي الْأَرْضِ وَمَا كَانَ
لَهُمْ مِن دُونِ اللَّهِ مِن أَوْلِيَاءَ يُضَعِّفُ لَهُمُ الْعَذَابَ

waxaana loo laablaabi cadaabka, mana karaan inay (Xaqa) maqlaan ama arkaan.

مَا كَانُوا يَسْتَطِيعُونَ السَّمْعَ وَمَا كَانُوا يُبْصِرُونَ ﴿١٠﴾

21. kuwaasu waa kuwa Khasaariyey Naftooda waxaana ka dhumay waxay been abuurteen.

أُولَئِكَ الَّذِينَ خَسِرُوا أَنفُسَهُمْ وَصَلَّ عَنْهُمْ مَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ﴿١١﴾

22. waxaana sugan inay kuwaasu Aakharo iyagu uun khasaaro badnaadeen.

لَا حَرَمَ أَنَّهُمْ فِي الْآخِرَةِ هُمْ الْآخَسِرُونَ ﴿١٢﴾

23. kuwa rumeeyey Xaqa oo camal fiican falay oo u noqday Eebahood kuwaasu waa Jannada Ehelkeeda wayna ku dhex waari.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَالْحَسَنَاتِ إِلَىٰ رَبِّهِمْ أُولَئِكَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿١٣﴾

24. waxay la midyihiin Labada kooxood mid indhala'iyoo mid dhaga la'iyoo mid wax arka iyo mid wax maqli, ma simanyihiin tusaale ahaan, miyeydaan wax xusuusaneyn.

*مَثَلُ الْفَرِيقَيْنِ كَالْأَصْمَىٰ وَالْأَصْرَىٰ وَالْبَصِيرِ وَالسَّمِيعِ هَلْ يَشْرِيانِ مَثَلًا أَقْلًا تَذَكَّرُونَ ﴿١٤﴾

Cid Ilaahay ka carari karta ma jirto, cid wax ka faydi oo Eebe ka soo hadhayna ma jirto, ciddii xaqa ka indho beesha ama maqli waydana waxaa loo laab laabi Cadaabka, waana kuwa khasaariyey Naftooda kana dhumay waxay been abuuran jireen, waana kuwa khasaaray Aakharo, kuwa xaqa rumeeyey oo camal fiican falayna oo Eebe u toobad keena waxay mudan Janno o ku waari, Labada kooxood oo ah kuwa Xaqa rumeeyey iyo gaalada waxay la mid yihiin mid wax arki waxna maqli iyo indhoole dhaga la' mana sinna ciddii wax xusuusan, gaalo waa indho iyo dhaga la'dahay, Mu'minna waa wax arke wax maqli, yaana lagu khaldamin wax araggooda Adduun, Xooluhuba waxbay arkaan, Huud (20-24).

25. waxaan u dirray (Nabi) Nuux qoomkiisii (Isagoo leh): waxaan idiin ahay dige Cad.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ إِتِي لَكُمْ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿١٥﴾

26. inaydaan Caabudin wax Eebe ka soo hadhay, waxaan idiinka cabsan korkiinna cadaab Maalin daran.

أَنْ لَا تَعْبُدُوا إِلَّا اللَّهَ إِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمِ الْبَاسِ ﴿١٦﴾

27. waxayna dheheen madaxdii Gaal-lowday oo qoomkiisa ka mida waxaan bashar nala mida ahayn kuguma aragno, kugumana aragno inuu ku raacay waxaan ahayn kuwanna xun xun ee ku deg dega ra'yiga, Kuugumana aragno korkannaga wax dheeraada waaxaanse idiin malaynaynaa Beenaalayaal.

فَقَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَوْمِهِ مَا تَرَبُّكَ إِلَّا بَشْرٌ مِثْلَنَا وَمَا تَرَبُّكَ إِلَّا الَّذِينَ هُمْ أَرَادُوا بُادِيَ الرَّأْيِ وَمَا تَرَبُّ لَكُمْ عَلَيْنَا مِنْ فَضْلٍ بَلْ نَنْظُرُكُمْ كَذِبِينَ ﴿١٧﴾

28. wuxuuna yidhi: Qoomkayow ka warrama haddaan Xujo (cad) oo Eebahay ku sugnahay uu ina siiyey naxariis Xaggiisa oo Laydinka indho tiray miyaan idinku laasimin karraa idinkoo nici.

قَالَ يَقَوْمِ أَرَأَيْتُمْ إِنْ كُنْتُ عَلَىٰ بَيْتِهِمْ مِنْ رَبِّي وَءَاتَانِي رَحْمَةً مِنْ عِنْدِهِ فَعَمِيتَ عَلَيْكُمْ أَنْزِلْ يُكْمِئُهَا وَاتَّخِذْهَا كُرْهُوْنَ ﴿١٨﴾

Qisada Nabi Nuux wax badan yey Quraanka ku soo Aroortay, wuxuuna ahaa Nabigii ugu horreeyey ee si cad ugu yeedha Dadka, halkanna markuu ugu yeedhay Qoomkiisii caabudidda Ilaahay kaliya ugana digay Cadaab daran waxay sidii caadada u ahayd gaaladii madaxda ahayd ee Qoomkiisu ugu Jawaabeen inuu Dadka la mid yahay dad xun xunna raaceen wax dheeraad ahna uusan lahayn ey una maleyn inuu been sheegi, wuxuuse ku suganyahay Xujo Cad oo Eebe iyo Naxariis uu ka siiyey Agtisa, oyse ka indho beeleen uusan Qasabna ku lahayn iyagoo Nici Xaqa, taasina waxay muujin dabeecad wanaagga Nabiyada inta xaqa ku raacda iyo inayna raacidda Diintu Qasab ahayn ee ciddii doontana Raaci, tii kalana aan xoog lagu galinayn, waxaase loogu sheegi si cad oo Qabow oo wanaaga. Huud (25-28).

29. Qoomkayow idin warsan maayo Xoolo, Ajirkayga Eebaa haya, mana eryayo kuwa xaqa rumeeyey illeen iyagu waxay la kulmi Eebahooda, wa-xaanse idinku arkaa Qoom Jaahiliina.

وَيَقُولُوا لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مَا لَإِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَىٰ اللَّهِ وَمَا أَنَا بِطَارِدِ الَّذِينَ ءَامَنُوا إِنَّهُمْ مُلْكُوا رَبِّهِمْ وَلَكِنِّي أَنْزَلْتُكُمْ قَوْمًا يَمُجُّوْنَ ﴿١٩﴾

30. Qoomkayow yaa iiga gargaari Eebe haddaan eryo kuwaas (Xaqa rumeeyey) miyeydaan wax Xusuusanayn.

وَيَقُولُ مَنْ يَبْصُرُنِي مِنَ اللَّهِ إِنْ طَرَدْتُهُمْ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٢٠﴾

31. idinma dhahayo waxaa agtayda ah Khasaa'intii Eebe mana ogi waxa maqan, idinmana odhanaayo waxaan ahay Malaa'ig, idinmana odhanaayo kuway yasayso indhihiinnu ma siinayo Eebe khayr, Eebaa og waxa Naftooda ku sugan, markaas waxaan ka mid noqon Daalimiinta.

وَلَا أَقُولُ لَكُمْ عِندِي خَزَائِنُ اللَّهِ وَلَا أَعْلَمُ الْغَيْبَ وَلَا أَقُولُ إِنِّي مَلَكٌ وَلَا أَقُولُ لِلَّذِينَ تَزْدَرِي أَعْيُنُكُمْ لَنْ يُؤْتِيَهُمُ اللَّهُ خَيْرًا اللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا فِي أَنْفُسِهِمْ إِنِّي إِذًا لَمِنَ الظَّالِمِينَ ﴿٢١﴾

Wuxuu u sheegay Nabi Nuux Qoomkiisa inuusan wax ujuura ah ka warsanayn Xaqa Gaadhsiiintisa, uusan fogaaynayna kuwa Xaqa rumeeyey ee ka cabsada Xaalkaas, illeen waa arrin Jaahilimee, hadduu eryo Dadkaasna wax Eebe uga gargaari ma jiro, mana u sheegan in Khasnadaha Eebe Agtisa tahay, ama waxa maqan ogyahay, ama Malaa'ig yahay, mana u sheegin in Mu'miniinta ay xaqirayana uusan Eebe Khayr siinayn, Eebaa og xaalkooda kuna shaqo leh, ciddii xumaysana waxay ka mid noqon Daalimiinta, waana taas xaalka xaq yeedhayaasha iyo Gaalada Xaqa diidda. Huud (29-31).

32. waxay dheheen Nuuxow waad nala doodday ood badisay la doodkannaga, ee noo keen waxaad noo yaboohayso haddaad run sheegi.

قَالُوا نَبِيٌّ مِثْلَ مَا كَانَ آبَاؤُنَا أَن يَخْبَوْا مِنْهُ أُمَّةً قَالُوا هُوَ أَتَىٰ عَلَىٰ الْآدَمِيَّةِ وَنَاصَرَ مَا كَفَرُوا فَيُكَلِّمُنَا أَرْسَالَكَ وَإِنَّكَ مُلْكُ اللَّيْلَةِ إِذْ يَنْسَلُ الْغُبَابُ وَيَنْبَغِي السُّجُودَ يُرْسِلُ الرِّيَّاحَ فَتُحْمَلُنَا فِي سَحَابٍ مِثْلَ النُّجُومِ إِنَّ إِلَٰهَ لَكُنَّا عِلْمٌ كَيْفَ أَخْبَرْنَاكَ بِهَذَا كَذِبًا مَّكَرَتَنِ بِكَ وَلَٰكِن لَّا نَسْمَعُ لَكَ قَوْلًا وَلَا نَجِدُ لَكَ إِذًا عَلَمًا ﴿٢٢﴾

33. wuxuuna yidhi waxaa uun idiin keeni (kara) Eebe hadduu doono, mana tihiin kuwo daalin Eebe.

قَالَ إِنَّمَا يَأْتِيَكُمْ بِهِ اللَّهُ إِنْ شَاءَ وَمَا أَنْتُمْ بِمُعْجِزِينَ ﴿٣٣﴾

34. waxna idiinma tarto Naseexadaydu haddaan doono inaan idiin naseexeeyo hadduu Eebe doono inuu idin baa-diyeeyo, illeen waa Eebihiine xagiisaana laydiin celin.

وَلَا يَنْفَعُكَ نَصِيحَتِي إِنْ أَرَدْتُ أَنْ أَنْصَحَ لَكَ إِنْ كَانَ اللَّهُ يُرِيدُ أَنْ يُعَذِّبَكَ هَوِّنْ بِكَ وَمَا تَجْعَلُونَ ﴿٣٤﴾

35. mise waxay dhihi isagaa been abuurtay, waxaad dhahdaa haddaan been abuurto dambigaygu anuu isaaran yahay, anuguna bari baan ka ahay waxaad dambaabtaan.

أَمْ يَقُولُونَ أَفَأَنْتَ بَشَرٌ لِمَ نَجِدَكَ مَعْلُومًا لِمَنْ أَجْرَلِي وَأَنْتَ بَرِيءٌ وَمَا نَجْرِي مَوْنٌ ﴿٣٥﴾

Gaaladii hadalkii yey ku adkeeyeen Nabi Nuux waxayna dheheen waad nala murantay ood badisay murankii ee noo keen ciqaabtaad noogu Gooddin haddaad run sheegayso, taasina waa caadada Xaq diidayaasha had iyo jeer inay warsadaan Nabiyada waxaasoo kale, wuxuuse ugu Jawaabay Nabi Nuux in keenidda arrintaas Eebe uun karo kuna shaqo leeyahay hadduu doono, wax daalin karana uusan jirin, naseexana ayan wax u tarayn cidduu Eebe dhumiyo markay Xaqa diiddo oo ka jeedsato, waxayna ku sheegeen inuu been abuurtay xaalkuu la yimid, wuxuuse ugu jawaabay in dambigiisu isaga saaran yahay, isna dambigooda ka madaxbannaan yahay, taasina waxay ku tusin in Nabiyaduna isku hadal yihiin xaq diidayaashuna isku war iy dabeeco yihiin. Huud (32-35).

36. waxaa loo waxyooday Nabi Nuux inuusan ku rumeynayn Qoomkaaga inta ku rumaysay waxaan ahayn ee ha u murugoon waxay fali.

وَأَوْحَىٰ إِلَىٰ نُوحٍ أَنَّهُ لَنْ يُؤْمِنَ مِنْ قَوْمِكَ إِلَّا مَن قَدْ ءَامَنَ فَلَا تَتَّبِعِ يَمَّاكَ أَوْ يَفْعَلُونَ ﴿٣٦﴾

37. samaysana doon, annagoo ku dhaw-ri, kuuna waxyoon, hana igula hadlin (xaalka) kuwii dulmi falay, waa la maansheyne.

وَأَصْحَ الْفُلْكَ بِأَعْيُنِنَا وَوَحْيَنَا وَلَا فُحْطِيبِي فِي الَّذِينَ ظَلَمُوا إِنَّهُمْ مُّعَذَّرُونَ ﴿٣٧﴾

38. wuxuu samaynayey Doon mar kasta oo Qoomkiisa koox ka mida martana way ku jees jeesayeen wuxuuna ku dhahayey haddaad nagu jees jeestaan anaguna waan idinku jees jeesi saad u jees jeesaysaan.

وَصَبَّحُ الْفُلْكَ وَكَلَّمَا مَرَعَالِيَهُ مَلَائِكَةُ قَوْمِهِ سَخِرُوا مِنْهُ قَالَ إِنْ سَخِرُوا مِنَّا فَإِنَّا نَسْخَرُ مِنْكُمْ كَمَا تَسْخَرُونَ ﴿٣٨﴾

39. waadna ogaan doontaan cidduu u yimaaddo cadaab dulleeya kuna dago cadaab joogta ah.

فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ مَنْ يَأْتِيهِ عَذَابٌ يُخْزِيهِ وَيَحِلُّ عَلَيْهِ
عَذَابٌ مُّقِيمٌ ﴿٣٩﴾

40 markuu yimid amarkaannagii oo Tannuurkii burqaday waxaan ku nidhi ku xambaar Doonida nooc kasta Labo iyo Xaaskaaga, ciddii dhumid loo xukumay mooyee, iyo ciddii rumaysay xaqa (iyana ku xambaar) mana rumeynin wax yar mooyee.

حَتَّىٰ إِذَا جَاءَ أَمْرُنَا وَفَارَ التَّنُورُ قُلْنَا أَحْمِلْ فِيهَا
مِنْ كُلِّ زَوْجَيْنِ اثْنَيْنِ وَأَهْلَكَ إِلَّا مَن سَبَقَ
عَلَيْهِ الْقَوْلُ وَمَنْ ءَامَنَ وَمَا ءَامَنَ مَعَهُ
إِلَّا قَلِيلٌ ﴿٤٠﴾

Nabi Nuux wuxuu Eebe u waxyooday inuusan Qoomkiisa ka rumeyneyn xaqa inta horay u rumaysay mooyee waana inuusan u murugoon waxay fali oo xumaana, samaystana doon isagoo Eebe ilaalin una waxyoon, uusan Eebana kala hadlin xaalka kuwaas dulmiga falay illeen waa la maansheyne, wuxuuna samaynayey Doontii markay maraanna way ku jeesjeesayeen, wuxuuna ku dhahayey haddaad nagu jees jeestaan waanu idinku jees jeesi waadna ogaan doontaan cidduu u yimaaddo cadaab dulleeya kuna dhaco cadaab joogta ah, markuu yimid amarkii Eebe Biyhiina ka oo burqadeen tannuurka yaa Eebe ku yidhi Nabi Nuux ku xambaar doonta nooc kasta Labo, cidda Ciqaabi u sugaatay mooyee, inta ku rumaysayna ku xambaar, wax yar baana rumeeyey, taasina waxay ku muujin in Mu'miniintu ku sugan yihiin ujeeddo kaliya. Huud (36-40).

41. wuxuuna yidhi ku kora Magaca Eebe oy kuna socon kuna joogsan Eebahayna waa dambi dhaafe naxariista.

* وَقَالَ أَزْكَبُوا فِيهَا بِسْمِ اللَّهِ مَجْرِبُهُمَا
وَمُرْسَاهُمَا إِنَّ رَبِّي لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٤١﴾

42. wayna la socotay hir dhexdiis oo buuro la mida wuxuuna u dhawaaqay Nabi Nuux Wiikiisii wuxuuna ahaa meel ka gaar ah (Isagoo leh): Wiilkay-gow nala soo kor hana la jirin gaalada.

وَهِيَ تَجْرِي بِهِمْ فِي مَوْجٍ كَالْجِبَالِ وَنَادَىٰ نُوحٌ
أَبْنَهُ وَكَانَ فِي مَعْزِلٍ يَا بُنَيَّ أَزْكَبْ مَعَنَا وَلَا تَكُنْ مَعَ
الْمُكَفِّرِينَ ﴿٤٢﴾

43. wuxuuna ku yidhi waxaan u dunmi buur iga dhawrta Biyaha wuxuu yidhi (Nabi Nuux) wax celin kara maanta amarka Eebe ma jiro cid Eebe u naxariistay mooyee, waxaana kala dhex maray hirkii wuxuuna noqday Wiilkii kuwa la maansheeyey.

قَالَ سَتَدِينُ إِلَىٰ جِبَلٍ يَّصْطَلِي مِنَ الْمَاءِ قَالَ لَا
عَاصِمَ الْيَوْمَ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ إِلَّا مَنْ رَجَعًا وَحَالَ
بَيْنَهُمَا الْمَوْجُ فَكَانَ مِنَ الْمُغْرَقِينَ ﴿٤٣﴾

44. waxaana la yidhi: dhulow Liq Biyahaaga Samooyna qaad (Jooji) wa-

وَقِيلَ يَا أَرْضُ ابْلَعِي مَاءَكِ وَبَسِّمِي أَفْلَحِي

xaana la yareeyey «la gudhiyey» Biyihii waxaana la xukumay Amarkii waxayna Ku dul ekaatay Doontii Juudi waxaana la yidhi fogaansho haw sugnaato Qoomka Daalimiinta ah.

وَعِصَ الْأَمَاءِ وَفُضِيَ الْأَمْرُ وَأَسْوَتْ عَلَى
الْجُودِيِّ وَقِيلَ بَعْدًا لِلْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٤١﴾

Wuxuu yidhi Nabi Nuux: ku kora Doonta Magaca Eebe ee ay ku socon kuna joogsan illeen waa dambi dhaafe naxariistee, wayna la socotay hirka dhexdiisa iyadoo Buur oo kala ah, Nabi Nuuxna wuxuu u dhawaaqay Wiilkiisa oo ka durugsan wuxuuna ku yidhi: Wiilkayow nala soo kor hana ahaan la jiraha gaalada, wuxuuse sheegay inuu kori Buur ka dhawrta Biyaha, wuxuuse ku yidhi Nabi Nuux maanta wax celin kara amarka Eebe ma jiro cid Eebe u naxariisto mooyee, hirkiibaana kala dhex maray wuxuuna ka mid noqday kuwa la maansheeyey, Biyihiiina waa gudheen oo joogsadeen amarkiina waa la xukumay waxayna ku ekaatay Juudi halaagbaana ku dhacay Daalimiintii, wuxuu wariyey Ibnu Cabbas in Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi: Ammaanka Ummaddayda markay maanshoodaan waa inay akhriyaan Magaca Eebe markay doon kori.

Qisada Nabi Nuux iyo Qoomkiisa iyo sida loo halaagay Daalimiintii waa wax lagu waano qaato. Huud (41-44).

45. wuxuu u dhawaaqay (Baryey) Nabi Nuux Eebihii wuxuuna yidhi: Eebow Wiilkaygu wuxuu ka mid yahay Ehelkeyga Yabooahaaguna waa xaq (sugan) adaana xukunkaagu falsanyahay.

وَنَادَى نُوحٌ رَبَّهُ فَقَالَ رَبِّ إِنَّ ابْنِي مِنْ أَهْلِي وَإِنَّ
وَعْدَكَ الْحَقُّ وَأَنْتَ أَحْكَمُ الْحَاكِمِينَ ﴿٤٢﴾

46. Eebe wuxuu yidhi: Nuuxow Wiilku Ehelkaaga kama mid aha waana camal aan suubanayn ee hay warsan waxaad dan cilmi u lahayn, waxaan kaa waanin inaad jaahiliinta ka mid noqoto.

قَالَ يَنْبُوحُ إِنَّهُ لَيْسَ مِنْ أَهْلِكَ إِنَّهُ عَمَلٌ غَيْرُ صَالِحٍ
فَلَا تَسْتَأْذِنُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ إِنْ أَعْطَاكَ أَنْ تَكُونَ
مِنَ الْجَاهِلِينَ ﴿٤٣﴾

47. wuxuuna yidhi Nabi Nuux: Eebow waxaan kaa magan galay inaan ku warsado waxaan u cilmi lahayn haddaadan ii dambi dhaafin oodan ii naxariisan waxaan ka mid noqon kuwa khasaaray.

قَالَ رَبِّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ أَنْ أَسْأَلَكَ مَا لَيْسَ لِي بِهِ
عِلْمٌ وَلَا أَتَقَفِرُ لِي وَتَرْحَمَنِي أَكُنَ مِنَ
الْخَاسِرِينَ ﴿٤٤﴾

48. waxaa lagu yidhi: Nuuxow ku Deg nabadgelyo iyo khayr badan oo Xaggannaga ka ahaaday ayadoy Dushaada tahay Adiga iyo ummadaha kula jira, ummadana waannu u raaxayn markaas waxaa taaban cadaab daran oo xaggannaga ka ahaada.

قِيلَ يَنْبُوحُ أَمْ حِطَّ بِسَلْمِ مَوْتَنَا وَبَرَكَاتِ عَيْنِكَ
وَعَلَى أَمْرِ مَعْنٍ مَعَكَ وَأَمْرٌ سَمِعْتَهُمْ
فَرِيحَهُمْ مَوْتَنَا عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٤٥﴾

49. kaasi waa warkii maqnaa oon kuu

تِلْكَ مِنْ أَنْبَاءِ الْغَيْبِ نُوحِيهَا إِلَيْكَ مَا كُنْتَ

waxyoonayno, maadan ahayn mid og adi iyo Qoomkaagu midna kan hortiis ee samir cidhibta (Fiican) waxaa leh kuwa dhawrsada.

تَعْلَمَهَا أَنْتَ وَلَا قَوْمُكَ مِنْ قَبْلِ هَذَا فَاصْبِرْ إِنَّ
الْعَاقِبَةَ لِلْمُتَّقِينَ ﴿٤٩﴾

Markii la halaagay Wiilkii Nabi Nuux yaa waxaa qaaday Naxariistii Waalid wax dhalay markaasuu Ilaahay u cawday isagoo sheegi inuu Wiilku Ehelkiisa ka mid ahaa yabooha Eebana xaq yahay oo ahaa in Ehelkiisa loo korin Eebana Xukunkiisu caddaalad yahay, Eebase wuxuu u sheegay inuusan Wiilku Ehelkiisa ka mid ahayn marba hadduusan xaqa rumeynin, wax fiicanna ma aha mana habboona in Nabi Nuux waxaasoo kale warsado sida kuwaan wax ogayn, markuu is gartay Nabi Nuux eebana warsaday dambi dhaaf iyo Naxariis si uusan u khasaarin, waxaana la faray inuu ka dego doonta isaga iyo inta la jirta iyagoo heli nabadgalyo iyo Barako Eebe, arrintaasna waa waxyaalaha aan la ogaan karin haddaan Eebe Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u waxyoon, wuxuuna Eebe faray Nabiga inuu Adkaysto, wanaaggana waxaa ku dambayn kuwa dhawrsada ee xaq ku socda, Aayadahanna waxay muujin in qaraabadu iyo sokeeyanimadu tahay Caqiidada iyo Islaannimada, inaan lala mid noqon Daalimiinta. Huud (45-49).

50. Caadna waxaa loo diray Walaalkood Nabi Huud, wuxuuna yidhi Qoomkayow caabuda Eebe Ilaah kale idiinna sugnee waxaan been abuurasho ahayna kuma sugnidin.

وَالَّذِينَ عَادُوا أَخَاهُمْ هُودًا قَالَ يَقَوْمِ أَعْبُدُوا اللَّهَ مَا
لَكُمْ مِنَ اللَّهِ عِزَّةٌ إِنَّ أَنْتُمْ إِلَّا مُقْتَرُونَ ﴿٥٠﴾

51. Qoomkayow idinka warsan maayo xaqa ujuuro ujuuradayda waxaan uun ka mutaa Eebaha i Abuuray ee miyeydaan wax kasayn.

يَقَوْمِ لَا أَنْتُمْ عَلَيْهِمْ أَجْرٌ إِنْ أَجْرِي إِلَّا عَلَى
الَّذِي فَطَرَنِي أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٥١﴾

52. Qoomkayow Dambi dhaaf warsada Eebihii una toobad keena ha soo (Daayo) diro Samada (Roobka) korkiinna si badane hana idiinku kordhiyo xoog xooggiinnii, hana jeedsannina idinkoo Dambiilayaal ah.

وَيَقَوْمِ أَسْتَعِظُونَ أَرَأَيْتُمْ تَتَّبِعُونَ آيَاتِهِ
يُرْسِلُ السَّمَاءَ عَلَيْهِمْ فِطْرًا زَازًا وَيُرْسِلُ كُرْقُورًا
إِلَى قَوْمِكُمْ وَلَا تَنْتَوْنَهَا مُجْرِمِينَ ﴿٥٢﴾

Way isdaba joogtaa Qisada Nabiyada iyo siduu Eebe u diray iyo siday Qoomkoodii u beeniyeen una dhibeen, si Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u adkaysto una ogaado inaan dhibku Kali ku ahayn, halkanna waxaa laga waramay Nabi Huud iyo siduu Xaqa u tusiyay Qoomkiisii una sheegay inuusan xoolo ka rabin ee abaal marintiisa uu Ilaahay uun ka sugi, farayna inay Ilaahay kaliya caabudaan, danbi dhaafna warsadaan una Toobad keenaan, si Eebe ugu Naxariisto Roob iyo Barwaaqo iyo xoogna u siiyo, oyna Xaqka ka jeedsan, taasina waxay ku tusin in wanaaggu Sabab iyo noqdo barwaaqo iyo Khayr, xumaantuna watato dhibaato iyo Khasaare iyo luggooga. Huud (50-52).

53. waxay dheheen Huudow noolama aadan imaannin Xujo cad kagamana tageynno Ilaahyahannaga hadalkaaga kumana rumeynayno.

قَالُوا يَا هُودُ مَا جِئْتَنَا بِبَيِّنَةٍ وَمَا نَحْنُ
بِتَارِكِينَ ءَالِهَتِنَا عَنْ قَوْلِكَ وَمَا نَحْنُ لَكَ
بِمُؤْمِنِينَ ﴿٥٣﴾

54. wax kale kuguma dhaheeyno oon ahayn in Ilaahyahannaga Qaarkood kugu asiibeen xumaan (Cudur), wuxuu yidhi waxaan Eebe marag galin ee idinkuna marag noqda inaan bari ka ahay waxaad la wadaajinaysaan (Cibaadada).

إِنْ تَقُولُ إِلَّا اعْتَرَاكَ بَعْضُ آلِهَتِنَا بِسُوءٍ قَالَ إِنِّي أُشْهِدُ اللَّهَ وَاشْهَدُوْا أَنِّي بَرِيءٌ مِّمَّا تُشْرِكُونَ ﴿٥٤﴾

55. oo Eebe ka soo hadhay ee i dhagra dhammaan hana i sugina.

مِنْ دُونِهِ، فَكَيْدُوْنِي جَمِيْعًا تَعْمَلُوْنَ لَا تَنْظُرُوْنَ ﴿٥٥﴾

56. anugu waxaan tala saartay Ilaahay ee ah Eebahay iyo Eebihiin wax socda oosan foodda qabanayn ma jiro (Awoodayn) Eebahayna wuxuu ku sugan yahay jid toosan.

إِنِّي تَوَكَّلْتُ عَلَى اللَّهِ رَبِّي وَرَبِّكُمْ مَا مِنْ دَابَّةٍ إِلَّا هُوَ آخِذٌ بِنَاصِيَتِهَا إِنَّ رَبِّي عَلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٥٦﴾

Waxay dheheen: Huudow xujo cad nooma aadan keenin mana nihin kuwa uga tegi Ilaahyadooda hadalkaaga kuna rumeynmaynno, waxaa uun Waalli kugu asiibay Ilaahyadanna qaarkood markaad ka reebtay Cibaadadooda, wuxuuna ku yidhi: waxaan Eebe marag galin idinkana idin marag galin inaan bari ka ahay waxaad la wadaajinaysaan Eebe oo ka oo soo hadhay, ee bal i dhagra dhammaan hana i sugina, waxaan talasaartay Ilaahay ee Eebahay ah iyo Eebihiin, waxa socdo dhanna wuxuu ku hoos jiraa Awoodda Eebe illeen Eebe jid toosan oo Xaqa yuu ku suganyahaye. Gaaladuna had iyo jeer waxay dadka Muslimiinta ah ku Cabsi galiyaan waxyaalo kale oo Eebe ka soo hadhay, waase in Eebe si dhaba loo caabudo isaga uun laga cabsado, waxa ka soo hadhayna laga jeedsado Cibaadadooda iyo wax ka dayiddooda, lana talo saartaa illeen isagaa wax walba Awooddiisa ku hoos jiraaye, Jidka Toosan ee xaqa ah ee Eebe ee Islaamka ahna lagu socdaa Dadkana loogu yeedho laguna maamulo. Huud (53-56).

57. haddaad Jeedsataan waxaan idin gaadhsiiyey wixii laygu soo diray xag-giinna, wuuna idinka gadaal marin Eebahay qoom kale waxna kama dhibaysaan, Eebahayna wax kasta wuu ilaaliyaa.

فَإِنْ تَوَلَّوْا فَقَدْ أَبْلَغْتُكُمْ مَا أُرْسِلْتُ بِهِ، إِلَيْكُمْ وَيَسْتَخْلِفُ رَبِّي قَوْمًا غَيْرَكُمْ وَلَا تَضُرُّوْنَهُ، سَبِيحًا إِنَّ رَبِّي عَلَى كُلِّ شَيْءٍ حَفِيظٌ ﴿٥٧﴾

58. markuu yimid amarkannagii waxaan ku korinnay Huud iyo intii rumaysay Naxariistannada waxaanna ka korinnay Cadaab Adag.

وَلَمَّا جَاءَ أَمْرُنَا نَجَّيْنَا هُودًا وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُ بِرَحْمَةٍ مِنَّا وَنَجَّيْنَا هُمْ مِنْ عَذَابٍ عَلِيمٍ ﴿٥٨﴾

59. taasi waa Caad, waxay diideen Aayaadkii Eebahood, waxayna caasiyeen rasuulladiisii waxayna raaceen amarka islawayne madax adag dhammaantiis.

وَتِلْكَ عَادٌ جَحَدُوا بِآيَاتِنَا وَعَصَوْا رُسُلَهُ، وَاتَّبَعُوا أَمْرًا كَبِيرًا عَنِيدٍ ﴿٥٩﴾

60. waxaana la raaciyey Adduunyadan

وَاتَّبَعُوا فِي هَذِهِ الدُّنْيَا لَعَنَةً وَوَعَدَ الْفَاسِقِينَ إِلَّا الَّذِينَ

Lacnad iyo Maalinta Qiyaamaba, Caad way ka gaaloobeen Eebahood, Fogaansha (Halaagbaana) u sugnaaday Caadkii Qoomkii Huud ahaa.

عَادًا كَفَرُوا رَبَّهُمْ أَلَا بُعِدَ أَعْدَاءُ قَوْمِ هُودٍ ﴿٦٠﴾

Nabi Huud wuxuu ku yidhi haddaad cibaadada Eebe kaliya ka jeedsataan diiddaanna anigu waan idin gaadhsiiyey xaqii laygu diray, Eebana cid kaluu idinku beddeli waxna kama dhimaysaan, illeen wax walba Eebaa daalacane, markaasaa la halaagay illeen way kibreene oo xaqii ka jeedsadeene waana sidaas had iyo jeer, wuxuuna Eebe koriyey Huud iyo intii la jirtay ee Xaqa rumecysay, waxaana naxariis Eebe darteed looga koriyey Cadaab adag, wanataas reer Caad markay Beeniyeen Aayaadkii Eebahood Caasiyeenna Rasuulladiisii Raaceenna Amarka mid kastoo kibir badan oo isla weyn. Aduunyadana waa la lacnaday, Qiyaamadana waa lagu lacnadi, reer Caadna waxaa Ogaysiis ah inay ka gaaloobeen Eebahood, waxaana naxariis laga dheereeyey Caadkii Qoomkii Nabi Huud ahaa, waddadooda Ciddii martana waa la mid iyo ka xun. Huud (57-60).

61. Thamuudna waxaan u dirray Wa-laalkeed (Nabi) Saalax, wuxuuna yidhi Qoomkayow Caabuda Alle, macbuud xaqa oo ka soo hadhay ma idiin sugnee, isagaana idiinka ahaysiiyey Dhulka idinkuna Cammiray dhexdeeda ee dam-bidhaaf warsada una toobad keena illeen Eebahay waa dhawyahay oo ajiibaa (Baryadee).

﴿٦١﴾ وَإِلَى ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَالِحًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَهِ غَيْرُهُ هُوَ أَنشَأَكُم مِّنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا فَاسْتَغْفِرُوا لَهُمْ يَتَوَلَّوْا إِلَيْهِ وَإِنِّي لَقَرِيبٌ مُّجِيبٌ ﴿٦١﴾

62. waxay dheheen Saalaxow waxaad ku ahayd dhexdannada mid la rajeeyo arrintan ka hor ma waxaad naga reebi inaan caabudno waxay caabudayeen Aabayaalkanno annagu shaki daran baan kaga suganahay waxaad noogu yeedhi.

﴿٦٢﴾ قَالُوا يَا صَالِحُ أَقَدِ كُنْتَ فِينَا مَرْجُوًّا قَبْلَ هَذَا أَتَنهَنَّا أَنْ نَعْبُدَ مَا يَعْبُدُ آبَاؤُنَا وَإِنَّا لَإِى شَكٍّ مِّمَّا تَدْعُونَا إِلَيْهِ مُرِيبٌ ﴿٦٢﴾

63. wuxuu yidhi bal ka warrama had-daan xujo Eebahay ku sugnahay oo uu i siiyey Naxariis xaggiisa ah yaa iiga gargaari Eebe haddaan Caasiyo iimana kordhinaysaan waxaan khasaare ahayn.

﴿٦٣﴾ قَالَ يَا قَوْمِ أَرَأَيْتُمْ إِن كُنتُمْ عَلَىٰ بَيْتِهِ مِّن زَيْفٍ وَآءِ آتَنِي مِنْهُ رَحْمَةٌ مِّن يَّبصرِي مِنَ اللَّهِ إِن عَصَيْتُهُ فَمَا تَزِيدُونِي عُذْرًا تَحْسِبُونِ ﴿٦٣﴾

Qisada reer Thamuud wax badan yuu Quraanku sheegay wixii dhexmaray Nabi Saalax, halkanse waxay sheegeen inay u han waynaayeen Nabi Saalax intuusan ka reebin Cibaadada waxay Aabayaalkood Caabudi jireen oo Baadil ah, waxayna sheegeen inay ka shakisan yihiin wuxuu ugu yeedhi, wuxuuse ugu jawaabay inuu xaq iyo xujo ilaah oo cad ku saganyahay, warkooduna waxaan khasaare ahayn u kordhinayn hadduu maqlo, waana kaas xaqa iyo Baadilku say u kala Muuqdaan. Huud (61-63).

64. Qoomkayow tan waa Hashii Eebe, Calaamad bayna idiin tahay ee iska Daaya ha cunto Dhulka Eebe hana ku taabannina Xumaan oo markaas idin qabto Cadaab dhaw.

وَيَقُولُ هَذِهِ نَاقَةُ اللَّهِ لَكُمْ آيَةٌ
فَذُرُوهَا تَأْكُلُ فِي أَرْضِ اللَّهِ وَلَا تَمْسُوهَا بِسُوءٍ
فِي أَحْذَانِكُمْ عَذَابٌ قَرِيبٌ ﴿١٤﴾

65. wayse dileen Hashii, wuxuuna ku yidhi ku raaxaysta guryihiinna Saddex maalmood kaasina waa yabooh aan la beeninayn.

فَمَقَرُّوْهَا فَقَالَ تَمَتَّعُوا فِي دَارِكُمْ ثَلَاثَةَ
أَيَّامٍ ذَلِكَ وَعْدٌ غَيْرُ مَكْدُوبٍ ﴿١٥﴾

66. markuu u yimid amarkii Eebe waxaan ku korinnay Nabi Saalax iyo intii rumaysay Naxariistanada iyo inaan (ka korinnay) dulliga Maalintaas, Eebana waa xoog badane Adkaada.

فَلَمَّا جَاءَهُ أَمْرُنَا نَجَّيْنَا صَالِحًا وَآلَ ذَرِيَّتِهِ آمِنًا
مَعَهُ وَبَرَحِمَتِهِ مِنَّا وَمِنْ خِزْيِ يَوْمِئِذٍ إِنَّ
رَبَّكَ هُوَ الْقَوِيُّ الْعَزِيزُ ﴿١٦﴾

67. waxaana qabatay kuwii dulmi falay qaylo waxayna ahaadeen kuwo guryahooda ku dhex dhinta.

وَأَخَذَ الَّذِينَ ظَلَمُوا الصَّيْحَةَ فَأَصْبَحُوا
فِي ديارِهِمْ جثثيم ﴿١٧﴾

68. sidii iyagoon ku dhex nagaannin, Thamuud waxay ka gaalooben Eebahood waxayna muteen fogaansho (Halaag).

كَأَن لَّمْ يَغْتَوْا فِيهَا إِلَّا أَنْ نَمُودًا كَفَرُوا
رَبَّهُمْ إِلَّا بَعْدَ التَّمُودِ ﴿١٨﴾

Sidoo kale Saalax wuxuu u sheegay inay tanu tahay Hashii Eebe Mucjisana tahay ee ay iska daayaan ha daaqdo Dhulka Eebee, Xumaanna ayan ku taaban si aan loo ciqaabin, wayse Dileen waana la halaagay, waxaana nabad galay Nabi Saalax iyo intii Rumeysay, waxaana laga koriyey dulligii maalintaas, illeen Eebe waa xoog badane, waxaana ku dhacday Gaaladii qaylo oy bakhtiyeen, waxaadna mooddaa guryahoodii inaan la degin, reer Thamuudna waxay ka gaalooben Eebahood waxaana laga dheereeyey Naxariista Eebe ee waasaca ah, waana wax ciddii caqli leh ku waano qaadan, markaas xaqa uun ku toosi si ay u liibaanto labada daaroodba. Huud (64-68).

69. waxay ula yimaaddeen Malaa'igtan-nadii aan soo dirray Nabi Ibraahim Bishaaro, waxayna dheheen: salaamu korkaaga ha ahaato, isna wuxuu yidhi: Salaam, kamana nagaan (Daahin) inuu u keeno dibi la dubay (Hilibkiis).

وَلَقَدْ جَاءَتْ رُسُلُنَا إِبْرَاهِيمَ بِالْبُشْرَى قَالُوا سَلَامًا
قَالَ سَلَامٌ فَلَمَّا بَلَغَ أَنْ جَاءَهُ يَعْجَلُ حَبِيدٌ ﴿١٩﴾

70. markuu arkay in ayna gacmahoodu gaadhayn wuu la yaabay wuxuuna iska kasay cabsi xaggooda ah, waxayna dheheen ha cabsan waxaa naloo soo diray Qoomka (Nabi) Luude.

فَلَمَّا رَأَى أَيْدِيَهُمْ لَا تَصِيلُ إِلَيْهِ نَكَرَهُمْ
وَأَوْحَسَ مِنْهُمْ خِيفَةً قَالُوا لَا تَمَحِفْ إِنَّا
أَنْزَلْنَا إِلَى قَوْمٍ لُوطٍ ﴿٢٠﴾

71. haweeneydiisiina way taagnayd wayna qososhay waxaanna ugu bishaaraynay (Nabi) Isxaaq gadaashiina Yacquub (Wiilkiisii).

وَأَمْرًا لَهُ وَقَائِمَةٌ فَضَحِكْتُمْ فَبَشَّرْنَاهَا بِإِسْحَاقَ
وَمِنْ وَرَثِهِ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْحَاقَ يَعْقُوبَ ﴿٧١﴾

72. waxayna tidhi waa la yaabe miyaan dhali anoo cajuuso ah ninkaygana oday yahay arrintaasu waa wax la yaab leh.

قَالَتْ يَا وَيْلَتَى أَهْلٌ لِي وَنَا أَنَا عَجُوزٌ وَهَذَا بَعْلِي شَيْخًا
إِن هَذَا لَشَيْءٌ عَجِيبٌ ﴿٧٢﴾

73. waxay dheheen: ma waxaad la yaabi amarka Eebe, naxariistiisa iyo barakadiisa korkiinna ha ahaato, qoyskanow, Eebana waa la mahdiye la Sharrifo.

قَالُوا أَنْعَمِينَ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ تَرَحَّمْتُمُ اللَّهُ وَبَرَكَتُهُ
عَلَيْكُمْ أَهْلَ الْبَيْتِ إِنَّهُ حَمِيدٌ مَجِيدٌ ﴿٧٣﴾

Nabi Ibraahim Malaa'igtii way u bishaaraysay, wayna salaameen isna wuu ka Celiyey oo soo dhaweeey oo u darbay martiqaad, wuxuuna u qalay Dibi, mase ayan cunin illeen waa Malaa'ige, markaasuu shakiyey oo ka cabsaday, waxayse ku dheheen ha cabsan waxaa naloo soo diray Qoomka Nabi Luude, haweeneydiisiina way agtaagnayd ooy qososhay, waxaana loogu bishaareeyey Isxaaq oo Yacquubna dhali oos ka dambeyn, markay haweeneydii la yaabtay waxaa loogu jawabay ma waxaad la yaabi Amarka Eebe iyo naxariistiisa iyo barakadiisa korkiinna Dadka Gurigan, wax lala yaabo ma aha illeen Eebe waa Ammaanle sharaf leh, taasina waxay ku tusin isu bishaaraynta, in Dadka la xasiliyo, cabsadiga caadiga ah oo jirta, Waynida awoodda Eebe, Naxariistiisa iyo barakadiisa aan la koobi karin. Huud (69-73).

74. markay Nabi Ibraahim ka tagtay Cabsidii (argagaxii) una timid Bishaaradii yuu noqday mid nagula dooda xaalka Qoomka (Nabi Luud).

فَلَمَّا ذَهَبَ عَنْ إِبْرَاهِيمَ الرَّوْعُ وَجَاءَتْهُ الْبَشْرَى
حَمِيدًا لَتَأْتِيَ قَوْمٌ لوطٍ ﴿٧٤﴾

75. Nabi Ibraahimna waa dulsame noqosho iyo toobadkeen badan.

إِن إِبْرَاهِيمَ حَلِيمٌ ﴿٧٥﴾

76. Ibraahimow iskaga jeedso xaalkan, waxaa dhab u yimid Amarkii Eebahaaye, iyagana waxaa u imaan cadaab aan laga celinayne.

يَا إِبْرَاهِيمُ أَعْرِضْ عَنْ هَذَا إِنَّهُ قَدْ جَاءَ أَمْرٌ رَبِّكَ
وَإِنَّهُمْ عِندَ أَدْبَابِ عَذَابٍ مَّرْدُودٍ ﴿٧٦﴾

77. markay Malaa'igtaan soo diray u timid Nabi Luud wuu ka walbahaaray wuuna la cidhiidhyamay wuxuuna yidhi tani waa Maalin daran.

وَلَمَّا جَاءَتْ رُسُلُنَا لُوطًا سِئَاسًا لَهُمْ وَمَصَافِقِهِمْ
ذَرَعًا وَقَالَ هَذَا يَوْمٌ عَصِيبٌ ﴿٧٧﴾

78. waxaana yimid Qoomkiisii oo u deg degi xaggiisa horayna waxay u

وَجَاءَهُمْ قَوْمُهُمْ يَهْرَعُونَ إِلَيْهِ وَمِنْ قَبْلُ كَانُوا

ahaayeen kuwo fala Xumaan, wuxuuna yidhi Qoomkayow kuwaasu waa gabdhahaygii iyagaa idiin dhahiran ee ka dhawrsada Eebe hana igu dullaynina martidayda, miyuusan Nin rashiida «fiican» idinku jirin.

يَعْمَلُونَ السَّيِّئَاتِ قَالَ يَتَقَوَّمَهُنَّ وَلَا يَنْتَظِرُونَ فِي صَيْغِيٍّ
أَطَهَّرُ لَكُمْ فَاَنْتُمْ وَآلَهُ وَلَا تُخْزُونَ فِي صَيْغِيٍّ
أَلَيْسَ مِنْكُمْ رَجُلٌ رَشِيدٌ ﴿٧٨﴾

79. waxay dheheen waad ogtahay inaan ku lahayn gabdhahaaga xaq, waadna ogtahay waxaannu dooni.

قَالُوا لَقَدْ عَلِمْتُمْ مَالَنَا فِي بَنَاتِكُمْ مِنْ حَقِّ وَآتَاكَ
تَعْلَمُوا مَا نُرِيدُ ﴿٧٩﴾

Markay Cabsidii ka ba'day Nabi Ibraahim yuu galay inuu ka doodo Qoomka Luud illeen Nabi Ibraahim wuxuu ahaa toobad keen badane duisan, waxayse Malaa'igtii ku tidhi isaga jeedso Ibraahimow xaalkan amarkii Eebaa yimide, waxaana u imaan cadaab aan la celinayne, markay u yimaadeen Nabi Luudna wuu walbahaaray oo cidhiidhyamay isagoo yidhi maanta waa maalin daran, waxaana yimid Qoomkiisii oo Ordi, horayna waxay u fali jireen Xumaanta, wuxuuna ku yidhi: wakuwaase waa gabdhahaygii ee guursada iyagaa nadiif idiin ehe, Eebana ka cabsada hana igu dullaynina martidayda miyuusan Nin rashiida idinku jirin, waxayse sheegeen inayan dan ka lahayn gabdhihiisa uu garanna waxay dooni, Waa layaab kala fiicanaa hadal muslim Eebe rumeeyey iyo Gaal Eebe ka fogaaday oo xumaanta qasan, maxaase u dambeeyey, waa halaag. Huud (74-79).

80. wuxuu yidhi Nabi Luud: haddaan xoog idiin leeyahay ama u dunmi tiir adag (waan idin ciqaabi lahaa).

قَالَ لَوْ أَنَّ لِي بِكُمْ قُوَّةٌ أَوْ آوَى إِلَيَّ كُنْتُمْ
سَدِيدٌ ﴿٨٠﴾

81. waxay dheheen (Malaa'igtii) Luud waxaan nahay farriintii Eebahaa dhibna kuma gaadhsiiinayaan ee Guuri Ehelkaaga qayb habeenka ka mida, dibna hasoo dayina, haweeneydaada mooyee, waxaa ku dhici waxa ku dhacaya ballankkooduna waa subaxa, miyuusan subuxu dhawayn.

قَالُوا يَنْلُوطُ إِنَّا رُسُلُ رَبِّكَ لَنْ يَصْلُوا إِلَيْكَ فَأَنْسِرْ
بِأَهْلِكَ بِقِطْعٍ مِنَ الْبَيْلِ وَلَا يَلْتَفِتْ مِنْكُمْ أَحَدٌ
إِلَّا أَمْرَانَا إِنَّهُ مُصِيبَهُمَا مَا أَصَابَهُمْ إِنْ مَوْعِدُهُمْ
الصُّبْحُ أَلَيْسَ الصُّبْحُ بِقَرِيبٍ ﴿٨١﴾

82. markuu yimid amarkannagii waxaan ka yeellay korkeedii hoosteedii, waxaana ku daadinnay dhagaxyo la shiday oo israac raacsan.

فَلَمَّا جَاءَ أَمْرُنَا جَعَلْنَا عَالِيَهَا سَافِلَهَا وَأَمْطَرْنَا
عَلَيْهَا حِجَابًا مِّنْ سِجِّيلٍ مَّنصُودٍ ﴿٨٢﴾

83. lagu calaameeyey Eebahaa agtiisa, wax daalimiinta ka fogna ma aha.

مُسَوَّمَةٌ عِنْدَ رَبِّكَ وَمَاهِيٍّ مِنَ الظَّالِمِينَ
بِسْمِ اللَّهِ ﴿٨٣﴾

Wuxuu ku calaacalay Nabi Luud in hadduu Awood leeyahay ama ku tiirsan yahay Tiir adag uu ciqaabi lahaa Gaaladaas, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Eebe ha u Naxariistee Nabi Luud wuxuu ahaa mid ku tiirsan tiir adag (Allihiis), Malaa'igti waxay u sheegeen in Eebe soo diray uusan cabsanna, wax dhibana uusan gaadhayn, guuriyana Eelkiisa iyagoon dib soo eegayn, Haweeneydiisa oo la halaagi mooyee, waxaana la halaagi subaxdii oon fogayn, amarkii Eebaana u yimid oo waa la dabagaddiyay laguna soo daadiyey Dhagax Naara oo calaamaysan, arrintaasuna kama foga daalim oo dhan, waxaana loo baahanyahay in lagu waano qaato, wanaggana lagu dadaalo, xumaantana laga dheerdaado. Huud (80-83).

84. Madyanna waxaan u diray Walaa-kood (Nabi) Shucayb, wuxuuna yidhi: Qoomkayow Caabuda Eebe idiinma sugna Ilaah kalee, hana nusqaaminnina Beegidda (Miisidda) iyo miisaanka waxaan idinku arkaa khayre (xoolo), waxaana idiinka cabsan Cadaab Maalin koobi.

85. Qoomkayow oofiya Miisidda iyo miisaanka si caddalada hana ka nusqaaminnina Dadka waxooda Dhulkana ha fasaadinnina.

86. Baaqiga Eebe yaa idiin khayrroone, ma ihi mid idin ilaalin (karee).

87. waxay dheheen shucaybow ma salaadahaagaa ku fari inaan ka tagno waxay caabudayeen Aabbayaalkaanno ama ku fallo xoolahannaga waxaan doonno, adugu waxaad uun tahay dulbadane toosan (Jees jees dartiis).

Qoomkii Madyanna waxaa loo diray Nabi Shucayb waana meel ku taalla xijaas iyo Shaam dhexdooda oo u dhaw Magaalada Macaan, wuxuuna faray in Eebe kaliya caabudaan Miisidda iyo Miisaankana si caddaalada u dhammaystiraan khayrka Eebe iyo baaqiga wanaagsanna shifaaystaan Dhulkana aanay fasaadinnin dadkana waxooda ka nusqaaminnin si uusan u dhicin cadaab daran oo kooba, wayse ku jees jeeseen oy ku dheheen ma salaaddaadaa ku fari inaan ka tagno waxay Aabayaalkanno caabudi jireen ama say doonaan u maamulaan xoolahooda, waxayna dheheen waxaad tahay Nin aad u fiican iyagoo ku jees jeesi, waana xaal kala fog wanaaggu faray iyo xummantay ugu jawaabeen, illeen waa gaalee iyo caadadeede. Huud (84-87).

88. wuxuu yidhi: Qoomkayow bal ka warrama haddaan ku sugnahay xujo Eebahay iguna arsuqay risqi wanaagsan, oonan doonaynna inaan idiin dabo maro waxaan idinka reebi oonan doo-

﴿وَأِلَىٰ مَدْيَنَ أَخَاهُ شُعَيْبًا قَالَ يَا قَوْمِ
اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُ
وَلَا تَتَّبِعُوا الْيَهُودَ وَالنَّصَارَةَ إِنِّي
أُرِيدُكُمْ بِخَيْرٍ وَإِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ
يَوْمٍ مُّحِيطٍ ﴿٨٤﴾﴾

﴿وَيَقَوْمِ أَوْفُوا بِالْعَهْدِ إِنَّ الْعَهْدَ
بَيْنَكُمْ شَيْءٌ مَّا كُنْتُمْ مُّؤْمِنِينَ
وَمَا أَنَا عَلَيْكُمْ بِمُحْفِظٍ ﴿٨٥﴾﴾

﴿بَقِيَّتُ اللَّهِ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنْتُمْ مُّؤْمِنِينَ
وَمَا أَنَا عَلَيْكُمْ بِمُحْفِظٍ ﴿٨٦﴾﴾
﴿قَالُوا لَسُعَيْبٌ أَسْلَمَ لَكُمْ تَأْمُرُونَ أَن نَّبْرَأَ مَا
يَعْبُدُ آبَاءَنَا وَإِنَّا لَفَعَلٌ فِى أَمْرِنَا مَا نَسْتَأْذِنُ
إِنَّكَ لَأَنْتَ الْحَلِيمُ الرَّشِيدُ ﴿٨٧﴾﴾

﴿قَالَ يَا قَوْمِ أَرَأَيْتُمْ إِن كُنْتُمْ عَلَىٰ بَيْتِهِ مِّن رَّيِّ
وَرَزَقْنِي مِنْهُ رِزْقًا حَسَنًا وَمَا أُرِيدُ أَنْ
أَخْلِقَكُمْ إِلَىٰ مَا أَهْلَكَكُمْ عَنْهُ إِن أُرِيدُ إِلَّا

nayn waxaan wanaajin ahayn, intaan karo, waafajintaydana waxaan Eebe ahayn ma karo isagaana talo saartay xaggiisaana u noqon, (Toobad).

إِلِّمَّصْلِحَ مَا اسْتَطَعْتُ وَمَا تَوْفِيقِي إِلَّا بِاللَّهِ عَلَيْهِ
تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ أُنِيبُ ﴿٨٧﴾

89. Qoomkayow yuusan idinku xambaarin khilaafkaygu inuu idinku dhaco wixii ku dhacayy Qoomkii (Nabi) Nuux ama qoomkii Nabi Huud ama (Nabi) Saalax idinkamana foga waqtigii Qoomkii (Nabi) Luud.

وَيَقُولُ لَا يَحْمِلُنَا إِصْرَ شِقَاقِ أَنْ يُصِيبَكُمْ مِثْلُ
مَا أَصَابَ قَوْمَ نُوحٍ أَوْ قَوْمَ هُودٍ أَوْ قَوْمَ صَالِحٍ وَمَا
قَوْمَ لُوطٍ مِّنْكُمْ بِبَعِيدٍ ﴿٨٨﴾

90. ee dambi dhaaf warsada Eebihii una toobadkeena illeen Eebahay waa Naxariiste Jecel (Ciddii toobad keentee).

وَاسْتَغْفِرُوا رَبَّكُمْ ثُمَّ تُوبُوا إِلَيْهِ إِنَّ رَبِّي
رَحِيمٌ رُّدُودٌ ﴿٨٩﴾

91. waxay dheheen Shucaybow ma kasaynno wax badan ood sheegi, waxaana kugu aragnaa inaad dhaxdanna da ku tabar yar tahay, hadduusan Qoomkaagu jirin waan ku dhagaxyeyn lahayn, mana tihid adugu mid cisi nagu leh.

قَالُوا لَنُشْعِبَنَّ مَا نَفَقَهُ كَثِيرًا مِّمَّا قَوْلِ وَإِنَّا
لَنَرَاكَ فِي سَاءِ صَاحِبِينَ وَلَوْلَا رَهْطُكَ لَرَجَمْنَاكَ وَمَا
أَنْتَ عَلَيْنَا بِعَزِيزٍ ﴿٩٠﴾

92. wuxuu yidhi: Qoomkayow ma jamaacadaydaa idin kala wayn Eebe ood ka yeelateen waxaad dhabarkiinna ka tuurtaan (Xaqa), Eebahayna waxaad falaysaan wuu koobay.

قَالَ يَقُولُونَ مَا رَأَوْا هَاطُوا أَغْرَعْنَا عَلَيْهِمْ مِنَ اللَّهِ
وَأَنخَدْنُوهُمْ وَرَأَى كُورَ ظَهْرِنَا إِنَّا رَبُّ يَمَا
تَعْمَلُونَ مُحِيطٌ ﴿٩١﴾

Nabi Shucayb wuxuu ku sugnaa xaqa, Eebana wuxuu siiyey Nabinnimo iyo Risqi fiican, mana u daba marayn xumaantuu ka reebi sida Dadka qaar kiis ee liita falaan, waxaan wanaajin ahaynna ma rabin, Eebuuna talasaaranayey, wuxuuna uga digay in khilaafkoodu u sababo halaagii ku dhacay Ummadihii ka horreeyey oo kale, oyna ku habboontahay inay Eebe u noqdaan, illeen waa naxariiste khayr jecel, wayse diideen oy sheegeen inayn kasayn wax badan oos sheegi, tabar yarina ay ku arkaan, haddayna ixtiraamayn Qoomkiisana ay dhagax la dhici lahaayeen, wuxuuna la yaabay in Qoomkiisu kala waynaado Eebe iyo Xaqa, oyna ka jeedsadeen isagoo Eebe koobay waxay fali. Wanaaggana waa in Dadka la faro aadna adugu fartoonto eedan xumaantii u dabo marin taasi waa ceebe, sidoo kale isla waynida iyo in qabiil iyo qoom ka waynaado xaqa waa wax la yaab leh. Huud (88-92).

93. wuxuu yidhi: Qoomkayow ku camal fala dariiqadiinna anna waan camal fali waxaadna ogaan doontaan cidduu u yimaaddo cadaab dulleeya iyo cidda beenaalaha ah ee suga anna waan idinla sugiye.

وَيَقُولُ أَعْمَلُوا عَلَيَّ مَا كُنْتُمْ إِنِّي عَمِلٌ
سَوْفَ تَعْلَمُونَ مِن يَأْتِيهِ عَذَابٌ يُخْزِيهِ وَمَنْ
هُوَ كَذِبٌ وَأَرْتَقِبُوا إِنِّي مَعَكُمْ رَقِيبٌ ﴿٩٢﴾

94. markuu yimid amarkannagii waxaan ku korinnay Shucayb kuwii rumeeeyey naxariistannada, waxaana qabatay kuwii dulmi falay qaylo waxayna ahaadeen kuwo guryahoodii ku dhintay.

وَلَمَّا جَاءَ أَمْرُنَا نَجَّيْنَا شُعَيْبًا وَالَّذِينَ آمَنُوا
مَعَهُ بِرَحْمَةٍ مِنَّا وَأَخَذَتِ الَّذِينَ ظَلَمُوا
الصَّيْحَةَ فَأَصْبَحُوا فِي دِيَارِهِمْ جثِيمِينَ ﴿١١٤﴾

95. sidii iyagoon ku nagaannin, fogaansho (halaag) baa u sugnaaday Madyan siday u fogaatay Thamuud (u hallagsantay).

كَأَن لَّمْ يَغْفُرْ لِفِيهَا إِلَّا بَعْدَ الْمَدِينِ كَمَا بَعَدَتْ
ثَمُودُ ﴿١١٥﴾

Ugu dambayn markuu Nabi shucayb ka quustay xaalkoodii wuxuu ugu gooddiyey in cid walba say rabto ku socoto waxaa la ogaan doonaa cidduu cadaab dulleeysa u yimaaddo oo beenaala ah, saasna la wada sugo, waxaana la halaagay Gaaladii islawaynayd ee madaxa adkayd, wuxuuna Eebe koriyey Nabi Shucayb iyo intii rumeysay, saasayna reer madyan halaag iyo ciqaab ugu dhacday, waana abaalka xaq diidayaasha wanaagga neceb xumahana jecel, waana arrin u baahan ku waano qaadasho iyo ka digtooni qallooc. Huud (93-95).

96. waxaannu dhab ula dirray Nabi Muuse Ayaadkannagii iyo xujo cad.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ بِرَآئِنَا وَسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿١١٦﴾

97. xagga Firoon yaana u dirray iyo Qoomkiisii, waxayna raaceen amarkii Fircoon, amarka Fircoonna ma ahayn mid toosan (Hanuunsan).

إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَئِهِ فَاتَّبَعُوهُ أَمْرَ فِرْعَوْنَ وَمَا
أَمْرُ فِرْعَوْنَ إِلَّا بُرْسُودٌ ﴿١١٧﴾

98. wuxuu hor qaadi Qoomkiisa Maalinta qiyaame, wuxuuna ku aroorin Naarta, meel lagu aroorana naarbaa u xun.

يَقْدُمُ قَوْمَهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فَأَوْرَدَهُمُ النَّارَ
وَبَسَّ أَوْرَدُ الْمُرُودُ ﴿١١٨﴾

99. waxaana la raacsiiyey Adduunyada Lacnad iyo maalinta Qiyaamaba, wax laysu kordhiyana waxaa u xun (Arrinta).

وَأَتَّبِعُوا فِي هَذِهِ لَعْنَةً وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ يَتَّبِسُ
الرِّقْدُ الْمُرْفُودُ ﴿١١٩﴾

100. arrintaasu waa warkii Magaalooyinka waana kaaga qisoonaaynaa, waxaana ka mida kuwo taagan iyo kuwo la halaagay.

ذَٰلِكَ مِنْ أَنْبَاءِ الْقُرَىٰ نَقِصُهُمْ عَلَيْكَ مِنْهَا
قَابِئُ الرَّحِيسِ ﴿١٢٠﴾

101. maanaan dulmiyiyin iyagaase dulmiyey naftooda waxna ugama tarin Ilaahyhoodii ay caabudayeen Eebe ka sokow markuu u yimid amarkii Eebahaa waxaan khasaare ahaynna uma kordhin.

وَمَا ظَلَمْتَهُمْ وَلَا كُنْ ظَلَمُوا أَنفُسَهُمْ فَمَا
أَغْنَتْ عَنْهُمْ آلِهَتُهُمُ الَّتِي يَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ
مِنْ مَنَىٰ وَلَمَّا جَاءَ أَمْرُنَا نَكَّأُوا وُجُوهَهُمْ عَادِرٍ
تَنْتَبِيسٍ ﴿١٢١﴾

Aayadahanna wuxuu Eebe ku sheegay qisadii Nabi Muuse iyo Cadowgii Diinta ee ahaa Fircoon iyo Colkiisii iyo in Fircoon ku socday Baadi halaag iyo naarna uu u hogaamin Qiyaamada Qoomkiisii meel xunna uu ku aroorin, lacnadna la raaciyey Aduunyada iyo Qiyaamadaba, kaasina waa warkii ummaadihii hore, waxaana jira wax raad leh iyo wax la tir tiray Eebana ma dulmiyiy iyagaa isdulmiyey wixii Eebe ka soo hadhay oy caabudayenna waxba uma tarin markay ciqaabtii u timid waxaan khasaare ahayna uma kordhin, taasina waxay ku tusin in ciddii ku hoggaamisa Dadka Xumaan Adduunyada uu Qiyaamada Naarta iyo Ciqaabta u hoggaamin, waana wax laga digtoonaado oo laga fogaado. Huud (96-101).

102. waana sidaas qabashada Eebahaa markuu doono inuu qabto oo ciqaabo magaalo (Dadkeed) oo dulmi fashay, qabashadiisuna way xanuun leedahay oy darantahay.

وَكَذَلِكَ أَخْذُ رَبِّكَ إِذَا أَخَذَ الْقُرَىٰ وَهِيَ ظَالِمَةٌ
إِنَّ أَخَذَهُ أَكْبَرُ مَشِيدٍ ﴿١٢٢﴾

103. arrintaasna calaamad baa ugu sugan ciddii ka cabsan cadaabka aakhiro waana maalin loo kulmin dadka Dartiis, waana maalin la soo Joogsan.

إِنِّي فِي ذَلِكَ لَآيَةٌ لِّمَن خَافَ عَذَابَ الْآخِرَةِ ۗ ذَلِكَ
يَوْمٌ مَّجْمُوعٌ لَّهُ النَّاسُ وَذَلِكَ يَوْمٌ
مَّشْهُودٌ ﴿١٢٣﴾

104. dibna uguma dhigaynno muddo magacaaban darteed mooyee.

وَمَا نُؤَخِّرُهُ إِلَّا لِأَجَلٍ مُّعَدَّدٍ ﴿١٢٤﴾

105. maalintuu Qiyaamuhu yimaaddo ma hadasho nafi idinka Eebe mooyee, waxaana ka mida dadka kuwo xun (Khasaaray) iyo kuwo liibaanay.

يَوْمَ يَأْتُ لَأَنكَرُ نَفْسٍ إِلَىٰ بِيَادِنِهِ ۗ فَمَنَّهُمْ شِقَاقٌ
وَسَعِيدٌ ﴿١٢٥﴾

106. kuwa xumaadayna naarbaya gali dhexdeedayna ku hiinraagi kuna qaylyi.

فَأَمَّا الَّذِينَ سَقَوْا فَنُفِىَ النَّارِ لَهُمْ فِيهَا زَفِيرٌ وَشَهِيقٌ ﴿١٢٦﴾

107. iyagoo ku waari inta samooyinku jiraan iyo dhulku wuxuu Eebe doono mooyee, Eebahaana wuxuu doonuu falaa.

خَالِدِينَ فِيهَا مَا مَدَامَتِ السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ ۗ إِلَّا مَا شَاءَ
رَبُّكَ ۗ إِنَّ رَبَّكَ فَعَّالٌ لِّمَا يُرِيدُ ﴿١٢٧﴾

108. kuwa la liibaanayna jannay ku waari inta samooyinku jiraan iyo Dhulku wuxuu Eebe doono mooyee, waana siismo aan go'ayn.

* وَأَمَّا الَّذِينَ سَعِدُوا فَنُفِىَ الْجَنَّةِ خَالِدِينَ فِيهَا
مَا مَدَامَتِ السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ ۗ إِلَّا مَا شَاءَ رَبُّكَ
عَطَاءً غَيْرٍ يُغْتَدَرُ ﴿١٢٨﴾

Dulmi ciddiisuu la hadhaa, Eebana wuu sugaa daalimka markuu qabtana ma bixiyo siduu Nibigu yidhi, Dulmiguna waa waxyaalaha Eebe soo Dedejiyo ciqaabteeda inkastoo dadku dherersado mararka qaarkood illeen waqtigaa ku kala duwan Eebe agtiisa iyo dadkee, saas darteed waa in dulmiga laga fogaado, illeen waxaa dambeeya cadaabkii aakhiro iyo qiyaamo la soo kulmin, cid Eebe idmo mooyee cid hadliina ayan jirin, dadkuna laba nooc noqon mid khasaaray iyo mid liibaanay, labo jidna ay kala qaadi Naar iyo janno, markii naarta laga soo bixiyo ciddii ashahaado ku dhimatay yaa Malakulmood dhiman markaasaa la dhahaa ehelu jannow waad waaraysaan dhimanna maysaan, Ehelu Naarow waad waaraysaan dhimanna maysaan, halkaasana lagu kala tegi oyna kala caddaan ciddii faras Saarrayd iyo ciddii dameer saarayd markuu boodhu ku faydmo, waana dhab sugan. Soo reebidduna ma aha in gaalada Naarta laga soo bixin ama Ehelu Jannuhu ka bixi ee waa in ciddii ashahaadata laga bixin Naarta, Mu'miniintuna ay ku waari Jannada sida aayadda ka muuqata dhammaadkeeda. Huud (102-108).

109. ha ka shakin (xumaanta) waxay caabudi kuwaasu, ma caabudayaan waxay Aabayaalkood caabudayeen mar hore mooyee, waana u dhammaynaynaa qaybtooda (Ciqaabta), oon laga Nusqaaminayn.

فَلَا تَكُ فِي مِرْيَةٍ مِمَّا يَبْعُدُونَ
إِلَّا كَمَا يَبْعُدُونَ آبَاءَهُمْ مِنْ قَبْلُ وَإِنَّا لَمَوُفُّوهُمْ
نَضِيبَهُمْ عَيْرَ مَنْقُوصٍ ﴿١٠٩﴾

110. waxaan siinnay (Nabi) Muuse Kitaabka (Tawreed) waana laysku khi-laafay, hadduunan jirin hadal Eebahaa oo horreeyey waa lakala xugmin lahaa dhexdooda, waxayna iyagu kaga sugan yihiin shaki daran.

وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ فَأَخْلَفَ فِيهِ
وَلَوْلَا كَيْفَةُ سَمْعِكَ مِنْ رَبِّكَ لَفُضِيَ بَيْنَهُمْ وَإِنَّهُمْ
لَفِي شَكٍّ مِنْهُ مُرِيبٍ ﴿١١٠﴾

111. dhammaan wuu u oofin Eebahaa Camalkooda illeen Eebe waxay camal fali wuu ogyahay.

وَإِن كَلَّمْنَا لَوْفِيَّ هُمْ رَبُّكَ أَعْمَلَهُمْ إِنَّهُ يَمَّا
يَعْمَلُونَ خَيْرٍ ﴿١١١﴾

112. ee u toosnow sida lagu faray adiga iyo inta kula toobadkeentay hana xad-gudbina illeen Eebe waxaad camal falaysaan wuu arkaaye.

فَأَسْتَفْتِمُ كَمَا أَمَرْتُ وَمَنْ تَابَ مَعَكَ وَلَا تَطَّعُرْ
إِنَّهُ يَمَّا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١١٢﴾

113. Ha u iilannina kuwa dulmi falay oo Naaru idin taabato, idiinmana sugno Eebe ka sokow Awliyo markaas, lay-diinna gargaari Maayo.

وَلَا تَرْكَبُوا إِلَى الَّذِينَ ظَلَمْتُمْ فَتَمَسَّكُمْ النَّارُ
وَمَا لَكُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ مِنْ أَوْلِيَاءَ
ثُمَّ لَا تَنْصُرُوهُمْ ﴿١١٣﴾

Wuxuu Eebe ku adkeeyey Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa he yeelee) iyo ummaddiisaba inayan shakiyin Xumaanta waxay caabudi gaalada iyo aabayaalkoodii hore, cid walbana waxaa loo dhammayn Abaalkeeda, Kitaabkii Nabi Muusana waa laysku khi-laafay haddaan Eebe horay u iraadaynaa waa lakala xukumi lahaa, waxayna ku suganyihiin shaki daran, una toosnaada sida laydin faray, hana kibrina illeen Eebe wax kama qarsoonee, hana u iilannina kuwa dulmiga falay oo markaas naaru idin taabato, wax Eebe ka soo hadhay oo idiin gargaarina usan jirin.

Abul caaliya wuxuu yidhi: Haka raalli noqonnina camalka gaalada, Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi: Ha u iilannina kuwa dulmiga falay, Aayaduhuna waxay soo jeedin in xumaanta si dhaba loo garto, lana toosnaado, daalimiintana aan loo iilan oon raalli laga noqon, taasi waxay ku tusin xumaanta iyo darraanta dulmiga cid fasha iyo mid gacan ku siisaba. Huud (109-113).

114. oog salaadda maalinta darfaheeda iyo qayb habeenka ka mida (saacaad) illeen wanaagu wuxuu tegsiyaa (Tirtiraa) xumaantee, taasina waa waanada kuwa Ilaah xuska badan.

وَأَقِمِ الصَّلَاةَ طَرَفِي النَّهَارِ وَرُفْعِ اللَّيْلِ إِنَّا
لِلْحَسَنَاتِ يَدْهِنُونَ أَلَسِيَّتِ ذَلِكَ ذِكْرِي
لِلذَّاكِرِينَ ﴿١١٤﴾

115. samir (adkayso) ilaahay ma dayaco ajirka kuwa sama falee.

وَأَصْبِرْ فَإِنَّ اللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُحْسِنِينَ ﴿١١٥﴾

116. maxay uga mid ahaan waayeen Quruumihii hore dad khayr (caqli) leh oo ka reeba fasaadka dhulka, wax yar mooyee oo ka mida kuwaan korinnay xaggooda, waxayna raaceen kuwii dulmi falay wixii loogu raaxeeyey, waxayna ahaayeen dambiilayaal.

فَلَوْلَا كَانَ مِنَ الْقُرُونِ مِن قَبْلِكُمْ أُولُو بَقِيَّةٍ يَنْهَوْنَ عَنِ الْفَسَادِ فِي الْأَرْضِ إِلَّا قَلِيلًا مِّمَّنْ أَجْمَعَتْنَا مِنْهُمْ فِئْتَمَّةً وَاتَّبَعَ الَّذِينَ ظَلَمُوا مَا أَتَوْا فِيهِ وَكَانُوا مُجْرِمِينَ ﴿١١٦﴾

117. Eebana uma hallago magaalo dulmi iyadoo Eehlkeedu wax wanaajin.

وَمَا كَانَ رَبُّكَ لِیُهْلِكَ الْقَرْیَةَ بِظُلْمٍ وَأَهْلِهَا مُصْلِحُونَ ﴿١١٧﴾

118. hadduu doono Eebahaa wuxuu ka yeeli lahaa Dadka mid kaliya mana ka tagaan inay yihiin kuwo iskhilaafsan.

وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ لَجَعَلَ النَّاسَ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَا یُرِیْنَ مُخْتَلِفِینَ ﴿١١٨﴾

119. cid Eebe u naxariistay mooyee, saasaana Eebe ku abuuray, wayna taam noqotay kalimadii Eebahaa oo ah inuu ku buuxiyo jahannamo Jinni iyo insi dhammaan.

إِلَّا مَن رَّحِمَ رَبُّكَ وَلِذَلِكَ خَلَقَهُمْ وَتَمَّتْ كَلِمَةُ رَبِّكَ لِأَتْمَلَّانَ جَهَنَّمَ مِنَ الْجِنَّةِ وَالنَّاسِ أَجْمَعِینَ ﴿١١٩﴾

120. Dhammaan waxaannu kaaga qisoon wararkii rasuullada waxaan ku sugno qalbigaaga, waxaana tan kuugu yimid xaq iyo wacdi iyo waanada Mu'miniinta.

وَكَلَّا نَقُصُّ عَلَيْكَ مِن أَنبَاءِ الرُّسُلِ مَا نُثَبِّتُ بِهِ فُؤَادَكَ وَجَاءَكَ فِي هَذِهِ الْحَقُّ وَمَوْعِظَةٌ وَذِكْرَى لِلْمُؤْمِنِینَ ﴿١٢٠﴾

121. waxaad ku dhahdaa kuwaan rumeynin ahaada sidiinnaas (ku camal fala) annana waannu «ahaan» camal faliye.

وَقُلْ لِلَّذِینَ لَا یُؤْمِنُونَ أَعْمَلُوا عَلٰی مَكَاتِبِكُمْ إِنَّا نَعْمَلُونَ ﴿١٢١﴾

122. sugana annana waannu sugiye.

وَأَنْظِرُوا إِنَّا مُنْتَظِرُونَ ﴿١٢٢﴾

123. Eebe waxaa u sugnaaday waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, xaggiisaana loo celin amarka dhammaan ee caabud oo talo saaro, Eebana mahalmaansana waxaad falaysaan.

وَلِلَّهِ غِیْبُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَإِلَیْهِ یُرْجَعُ الْأُمُورُ كُلُّهَا فَعَبْدُهُ وَتَوَكَّلْ عَلَیْهِ وَمَا رَبُّكَ بِغَفِیلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١٢٣﴾

Salaadda waa in loo dadaalo illeen wanaaggaa tirtira xumaantee, shanta salaadood iyo salaadda jimce iyo soonku waxay gudaan asturaanna waxa u dhaxeeya haddii dambi wayn laga tago siduu Nabigu yidhi, waana in la adkaysto si Eebe wanaag noogu abaal mariyo, caqli iyo diinna la yeesho oo xumaanta la reebo, iyo fasaadinta dhulka iyo dulmi iyo raaxo xun jacaylka isagoo dambiile la yahay, Eebana waa caadil oo ma halaago cid toosan dulmin dartiis, Eebana hadduu doono dadka wuxuu ka dhigi lahaa mid kaliya kamase tagaan khilaaf cid Eebe u naxariistay mooyee, waxaase Eebe hormariyey in jahannamo laga buuxin Jinni iyo Insi. waxa la soo sheegay oo wararkii rasuullada ahna waxaa lagu adkayn Niyadda Nabiga. Huud (114-123).

Suurat Yuusuf



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. xuruufta hore waxay ku tusin mucjisa Quraanka, tanna aayaadkii Kitaabka cad (Quraanka).

الرَّسُلَ لَكَ آيَاتُ الْكِتَابِ الْمُبِينِ ١

2. Annagaana soo dejinay isagoo Quraan Carabi ah inaad kastaan.

إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ٢

3. Annagaa kaaga qisoon qisooyin tan u fiican waxyigaan Quraankan kuu waxyoonay dartiis, waxaadna ka mid ahayd hortiisa kuwaan wax ogayn.

نَحْنُ نَقُصُّ عَلَيْكَ أَحْسَنَ الْقَصَصِ بِمَا أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ هَذَا الْقُرْآنَ وَإِن كُنْتَ مِنْ قَبْلِهِ لَمِنَ الْغَافِلِينَ ٣

4. markuu (Nabi) Yuusuf ku yidhi Aabbihiis aabow waxaan arkay Kaw iyo Toban Xiddigood iyo Qorraxda iyo Dayaxa waxaan Arkay iyagoo ii Sujuudsan.

إِذْ قَالَ يُوسُفُ لِأَبِيهِ يَا أَبَتِ إِنِّي رَأَيْتُ أَحَدَ عَشَرَ كَوْكَبًا وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ رَأَيْتُهُمْ لِي سَاجِدِينَ ٤

5. wuxuuna yidhi (Aabbihiis Yacquub) Wiilkayow hawga Qisoonin Riyadaada Walaalaha ay markaas ku dhagraan dhagar, illeen Shaydaanku Dadka wuxuu u yahay col cade.

قَالَ رَبِّي لَآتَقْصُصُ رُؤْيَاكَ عَلَىٰ إِخْوَتِكَ فَيَكِيدُوا لَكَ كَيْدًا إِنَّ الشَّيْطَانَ لِلْإِنْسَانِ عَدُوٌّ مُبِينٌ ٥

6. Saasuuna kuu doortay Eebahaa kuuna baray fasiraadda Riyada iyo Xadiithyada, kuuna taam yeeli Nicma-diisa korkaaga iyo Yacquub Ehelkiisa siduu ugu taamyelay Labadaadii Waalid mar hore (Nabi) Ibraahim iyo (Nabi) Isxaaq Eebahaana waa oge falsan.

وَكَذَلِكَ بَجَّعْنَاكَ رَبُّكَ وَعَلَّمَكَ مِن تَأْوِيلِ الْأَحَادِيثِ وَيَسِّمُ بِعَمَتِهِ عَلَيْكَ وَعَلَىٰ آلِ يَعْقُوبَ كَمَا أَتَمَّهَا عَلَىٰ أَبَوَيْكَ مِن قَبْلِ إِبْرَاهِيمَ وَاسْحَقُ إِنَّ رَبَّكَ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ٦

Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: Eebaa Quraanka ku soo dejiyey Luqada u sharaf badan, Kitaabka u sharaf badan, Nabgiga ugu sharaf badan, Malagga u sharaf badan, Meesha u sharaf badan, Bisha u sharaf badan, Saasuuna dhan walba kaamil uga noqday. Qisada Nabi Yuusufna waa wax layaable Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ma oqoon waxyiga ka hor. wuxuuna arkay Nabi

Yuusuf Kaw iyo Toban Kiddigood iyo Qorraxda iyo Dayaxa oo u Sajuudi, Aabihiina wuxuu faray inuu ka qariyo Walaalihiis si ayna uxasdin una shirqoolin, illeen Shaydaanbaa Dadka Weheliya colna u ah, Eebaa doortay Nabi Yuusuf Barayna Cilmi iyo Fasiraadda Riyada una Nicmeeyey isaga iyo Ehelkii Yacquubba, Aabihiis iyo Aabbayaalkiisii hore Nabi Ibraahim iyo Nabi Isxaaq, Nabiguna wuxuu yidhi: Kii fiicnaa ee mid fiican dhalay mid fiicanna sii dhalay mid fiicanna sii dhalay waa Yuusuf Binu Yacquub Binu Isxaaq Binu Ibraahim. Nabiyadoo dhanna waa sharaf badanyihiin sida Nabigcenna. Yuusuf (1-6).

7. Yuusuf iyo Walaalihiis Calaamadbaa ugu sugan kuwa warsan (Waano).

﴿لَقَدْ كَانَ فِي يُوسُفَ وَإِخْوَتِهِ آيَاتٍ لِّلسَّائِلِينَ﴾^٧

8. markay dheheen Yuusuf iyo Walaalkiis yaa Aabbe naga jecelyahay inagoo koox ah, Aabbeheen wuxuu ku sugan yahay Baadi cad (Jecaylkaas).

﴿إِذْ قَالُوا لِيُوسُفُ وَأَخُو أَحَبُّ إِلَيْنَا مِمَّا نَحْنُ عُصْبَةٌ إِنَّ آبَاءَنَا لَفِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ﴾^٨

9. Dila Yuusuf ama ku tuura Dhulka ha idiin kaliyoobo Wajiga Aabbihiine aana ahaateen gadaashiis qoom Suubane.

﴿أَفْتَأُؤْيُسُفُ أَوْ أَطْرَحُوهُ أَرْضًا يَخْلُ لَكُمْ وَجْهَ أَبِيكُمْ وَتَكُونُوا مِن بَعْدِهِ قَوْمًا صَادِقِينَ﴾^٩

10. mid ka midaa yidhi ha dilina Yuusuf ee ku tuura Ceel salkiis ha qaateen qaar safaree haddaad wax falaysaan.

﴿قَالَ قَائِلٌ مِّنْهُمْ لَا تَقْتُلُوا يُوسُفَ وَأَلْقُوهُ فِي غَيَابَتِ الْجُبِّ يَلْتَقِطَ بَعْضُ السَّيَّارَةِ إِن كُنْتُمْ فَاعِلِينَ﴾^{١٠}

11. waxay dheheen Aabbow maxaad noogu aamini la'dahay Yuusuf anagoo u Naasixa.

﴿قَالُوا يَا أَبَانَا مَا لَكَ لَا تَأْمَنَّا عَلَى يُوسُفَ وَإِنَّا لَهُ لَنَصِحُونَ﴾^{١١}

12. nala dir barri ha cuno hana Ciyaaree anaguna isaga waannu ilaaline.

﴿أَرْسَلَهُ مَعَا عَدَائِرَ بَنِي قَنْعَانَ وَرَبْعَ وَيَلَعَبَ وَإِنَّا لَهُ لَنَحْفَظُونَ﴾^{١٢}

13. wuxuu yidhi Yacquub waxaa i walbahaarin inaad la tegtaan waxaana ka cabsan in Yeeyi Cunto idinkoo halmaansan.

﴿قَالَ إِنِّي لَيَحْزُنُنِي أَنَّ تَذْهَبُوا بِهِمْ وَأَخَافُ أَنْ يَأْكُلَهُ الَّذِينَ بَاتُوا بِعِثَابِ الْعَذَابِ﴾^{١٣}

14. waxay dheheen hadday Yey Cunto annagoo kooxa waxaan ka mid nahay kuwa khasaaray.

﴿قَالُوا لَيْسَ أَكْلُهُ أَكْلَهُ الَّذِينَ بَاتُوا بِعِثَابِ الْعَذَابِ إِذَا خَلِسُوا رُتَّ﴾^{١٤}

Qisada Nabi Yuusuf iyo Walaalihiis waxaa ku sugan waano iyo Xusuus. waxayna ku tashadeen Xasad dartiis inay ama dilaan Yuusuf ama Ceel ku ridaan, ugu dambayn midbaa u soo jeediyeey inay Ceel ku ridaan, Aabahoodbayna warsadeen wuxuu ugu Aamini la'yahay Yuusuf, waxayna warsadeen in la diro ha la soo ciyaaree, wuxuuna u sheegay inuu ka walbahaarini inay la tagaan uuna Dugaag uga Cabsan, waxayse sheegeen inay ilaalin oo dhawri oyna koox yihiin saasayna kula tageen. Maxamed Binu Isxaaq wuxuu yidhi: Waxay isku waafaqeen ariin wayn oo ah Qaraabo Goys, Caaq Waalid, Naxariis darro, iyagoo kala gayn Ilmo yar iyo Oday Aabihiisa oo duqa.

Waana arrin wayn waana in laga fogaado waxaasoo kale illeen waa halaage. Yuusuf (7-14).

15. Markay la tageen oy ku kulmaeen inay yeelaan Ceel salkii, Waxaan u waxyoonay waad uga warrami Amar-koodan iyagoon kasayn.

فَلَمَّا ذَهَبُوا بِهَا وَاجْمَعُوا أَنْ يَجْعَلُوهُ فِي غَيْبَتِ الْجَبِّ
وَأَوْحَيْنَا إِلَيْهِ لَتُنَجِّنَهُمْ بِأَمْرِهِ هَذَا وَهُم
لَا يَشْعُرُونَ ﴿١٥﴾

16. Waxayna u yimaadeen Aabahood habeenkii iyagoo ooyi.

وَجَاءَ وَآبَاهُمْ عِشَاءً يَبْكُونَ ﴿١٦﴾

17. Waxayna dhaheen aabbow waannu tagtay inaan orotonno Waxaana ku dhaafnay Yuusuf alaabtannada agteeda Markaasay yey cuntay aduguse nama rumaynaysid aanba Run sheegnee.

قَالُوا يَا أَبَانَا إِنَّا ذَهَبْنَا نَسْتَبِقُ وَتَرَكْنَا يُوسُفَ عِنْدَ
مَتَاعِنَا فَانْكُحِ الْزَيْنَبَ وَمَا أَنْتَ بِمُؤْمِنٍ
لَنَا وَلَوْ كُنَّا صَادِقِينَ ﴿١٧﴾

18. Waxayna la yimaadeen Qamiiskiisii oo Dhiig beena leh, wuxuuna yidhi (Yacquub) saas ma aha ee waxay idiin Qurxisay naftiinnu arrin (xaalkayguse) waa Samir fiican Eebaana laga kaal-maystaa waxaad tilmaamaysaan.

وَجَاءَهُ وَعَلَى قَمِيصِهِ بِدَمٍ كَذِبٍ قَالَ بَلْ سَوَّلَتْ
لَكُمْ أَنْفُسُكُمْ أَمْرًا فَصَبْرٌ جَمِيلٌ وَاللَّهُ الْمُسْتَعَانُ
عَلَى مَا تَصِفُونَ ﴿١٨﴾

Way la tageen Yuusuf, waxayna isku waafaqeen inay Ceel ku ridaan, Markay ku rideenna Eebbaa u waxyooday oo ogaysiiyay Yuusuf in cidhiidhigan farax ka danbayn ugana warrami Walaalihiis xaalka iyagoon garanayn, si ay Arrinta U adkeeyaan yay ula yimaadeen Waqti habeena Aabahood Qamiis dhiig leh iyagoo ooyi oo sheegi inay Yuusuf ku dhaafteen Alaabta agteeda iyaguna ciyaar iyo oroton aadeen halkaasna Yay ku cuntayinkastoon Aabahood rumaynayn si kasta ay Run u sheegaan, kuna yidhi naftiinnaa arrin idiin Qurxisay, waxaanse samri Samir fiican oon argagax lahayn Eebaana looga kaalmo warsadaa waxaad falaysaan waadna aragtaa inay wax Dhoodhoobeen oohin, qamiis dhiigle, hadal qurxin in Wiilkii Waraabe cunay, Taasina waxay nooga digi inaan lagu Khaldamin muuqaalka iyo wax Dhoodhoobka, caqli iyo Eebe kaalmaysi, iyo kaadsiinyo iso Samir iyo Adkaysina lagu soedo, Thawri: wuxuu yidhi: Sadex samirkay ka mid tahay inaad ka warramin xanuunkaaga, iyo dhibkaagan naftaadana ammaanin. Bukhaarina Wuxuu sheegay xaalkii Caa'isha iyo markay tidhi tusaale mahelayo aan ahayn Kii Yacquub, xaalkay waa Samir quruxsan Eebaana looga kaalmo warsadaa waxaad sheegaysaan, taasina waa xaalka Mu'miniinta dhabta ah. Yuusuf (15-18).

19. Waxaa yimid socoto waxayna di-reen Dhaamiye Wuxuuna siidaayay Wadaantiisii, wuxuuna yidhi Bishaaradayda waa Will, wayna Qarsadeen isagoo Badeeco ah, Eebana waa og yahay waxay fali.

وَجَاءَتْ سَيَّارَةٌ فَأَرْسَلُوا وَارِدَهُمْ فَأَدْلَى دَرَاهِمَهُ قَالَ
يَبَشِّرْهُ هَذَا عِلْمٌ وَلَسَوْتُهُ يَصْبَعُهُ وَاللَّهُ عَلَيْهِمْ
بِعَمَلِهِمْ ﴿١٩﴾

20. waxayna ku gateen Qiima jaban Dirhamo tiran Waxayna ahaayeen ku-waan rabin.

وَأَسْرَرُوهُ بِثَمَنٍ بَخِيسٍ دَرَاهِمَ مَعْدُودَةٍ وَكَانُوا فِيهِ
مِنَ الْزَاهِدِينَ ﴿٢٠﴾

21. wuxuu ku yidhi kii gatay oo Masar

وَقَالَ الَّذِي اشْتَرَاهُ مِنْ لَامِزَاتِهِ أَكْرَمِي

ah Haweenaydiisii (wanaagji) ixtiraam hooygiisa waxay u dhawdahay inuu na anfaco ama ka yeelanno ilmo, saasaana u Makaniinay Yuusuf dhulka iyo inaan barro fasiraad «Riyada» xadiithyada, Eebaana u adag arrinkiisa, Laakiin badida dadku ma oga.

مَثْوَاهُ عَسَىٰ أَنْ يَفْعَلْنَا أَوْ نَتَّخِذَهُ وَلَدًا وَكَذَٰلِكَ
مَكَّنَّا يُوْسُفَ فِي الْأَرْضِ وَلِنُعَلِّمَهُ مِن تَأْوِيلِ
الْأَحَادِيثِ وَاللَّهُ غَالِبٌ عَلَىٰ أَمْرِهِ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ
النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١١﴾

22. markuu gaadhay Xooggiisa yaan siinnay Xigmad iyo Cilmi (Nabinimo) saasaana ku Abaal marinaa samafalayaahsa.

وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُ آتَيْنَاهُ حُكْمًا وَعِلْمًا وَكَذَٰلِكَ
نَجِّنِي الْمُحْسِنِينَ ﴿١٢﴾

Eebe isagaa Awoodda cirka iyo dhulka iyo wax walba leh, wuxuuna u soo diray Yuusuf safar ka soo saaray Ceelkii kuna Bishaaraysatay, kuse gatay qiimi jaban illeen si dhib yar buu ku soo galaye oo way heleene, waxayna ka gateen Nin madaxa oo Masara wuxuuna faray Haweenaydiisii inay ixtiraamto, Waxaa suurawda inay Wiil ka dhigtaan ama Anfancee, saasaana Eebe yuusuf u Koriyay dhulkana u makaniyay una Baray Fasiraadda riyada iyo xadiithka, illeen Eebaa xaalka maamula una adage, in kastoon dadka badankiisu ogayn, Markuu xoogaystayna oo caqligiisu buuxsamay yuu Eebe siiyay cilmi iyo Nabinnimo, sidaasuuna Eebe ku abaal mariyaa wanaag falayaasha.

Cabdullahi ibnu Maseud wuxuu yidhi: waxaa wax u qiyaasi Ogaa dadka saddex Ninkii masar ee ku yidhi Haweenayda ixtiraam Yuusuf, iyo tii tidhi Aabaw noo ijaar (Nabi muuse), iyo sayid abii Bakar markuu sayid cumar uu magacaabay. saasayna ugu soo deg degtay Nabi yuusuf Naxaariistii iyo Bishaaradii Eebaha awoodda badan. Yuusuf (19-22).

23. Waxaa dalbatay naftiisa tii uu joogay gurigeeda waxayna xidhay albaabyadii waxayna ku tidhi kaalay, wuxuuna yidhi magan gal Ilaah illeen waa Sayidkaygii wuxuu wanaagjiyay hoygaygee mana Liibaanaan daalimiintu.

وَرَوَدَتْهُ الَّتِي هُوَ فِي بَيْتِهَا عَن نَّفْسِهِ وَغَلَّقَتِ
الْأَبْوَابَ وَقَالَتْ هَيْت لَكَ قَالَ مَعَاذَ اللَّهِ إِنَّهُ رَبِّي
أَحْسَنُ مَثْوَىٰ إِنَّهُ لَا يَفْلِحُ الظَّالِمُونَ ﴿١٣﴾

24. Way ku hammiday «doontay» isna waa ku hamniyey. Hadduusan arkin xujada Alle (waa ku Dhici lahaa wuxuu ku hammiyey), saasaana uga iili Xumaanta iyo falxumida illeen wuxuu ka mid yahay addomahannaga la doortay (Camalkana u kali yeela Eebe).

وَلَقَدْ هَمَّتْ بِرَبِّهِ وَهَمَّ بِهَا لَوْلَا أَنْ رَأَىٰ بُرْهَانَ
رَبِّهِ كَذَٰلِكَ لِيَصْرِفَ عَنْهُ السُّوءَ وَالْفَحْشَاءَ
إِنَّهُ مِن عِبَادِنَا الْمُخْلَصِينَ ﴿١٤﴾

25. Waxay u orotameen albaabka (irrida) waxayna ka goysay Qamiiskiisa gadaasha waxayna kula kulmeen ninkeedii irrida agteeda, Waxayna ku

وَأَسْتَقْبَا الْبَابَ وَقَدَّتْ قَمِيصَهُ مِن دُبُرٍ وَأَلْفَيْمَا
سَيْدَهَا لَدَا الْبَابِ قَالَتْ مَا جَزَاءُ مَنْ أَرَادَ بِأَهْلِكَ

tidhi maxaa lagu Abaal marin Cid la doontay Ehelkaaga (haweenaydaada) xumaan inla xidho ama Cadibaad daran la gaadhsiiyo mooyee.

سُوْرَةُ الْاٰلِ اٰنِ يٰسُجُنْ اَوْعَدَابِ الْاِيْمِ ﴿١٥﴾

Intixaankii yaa wali daba socday Nabi Yuusuf waxaana hunguriyaysay haweenaydii uu Gurigeeda joogay oo xidhay iridihii kuna tidhi kaalay, Wuxuuse ka Magan galay Eebe, kumana haboona inuu Khayaamo ninkii u wanaag falay, ee ku Ixtiraamay gurigiisa ama Eebe caasiyo illeen Daalim ma liibaane.

Way doontay Haweenaydii Yuusuf Naftiisa, isna wuu hammiyey, haddayna Dhawridda iyo ilaalinta Alle jirin (waa ku dhici lahaa wixii uu hammiyey), Eebaase dhawray tusiyayna xujooyin iyo Calaamad cabsi Eebe ku sii abuurta, saasuuna Eebe xumaanta uga Dhawray illeen waxuu ka mid yahay Addoomada Eebe doortay Camalkoodana Eebe u kali yeela, Wuxuuna u carary xagga irrida wayna ka daba orodday oy ka goysay Qamiiskiisii xagga danbe, waxayna kula kulmeen Ninkeedii irrida agteeda, waxayse Doontay inay Yuusuf ku rogtu xumaanta waxayna la soo boodday inay ku tidhaahdo Ninkeedii cidda xaaskaaga xumaan la doontay Abaalkiisu waa in la Xabiso ama Ciqaab daran la Dhadhan siiyo, Halkaasna waxaa ka muuqday masabid iyo nabidda xaq darro ee dad ku talo galo iyo sida la isu dulmin. Yuusuf (23-25).

26. wuxuu yidhi Nabi Yuusuf iyadaa i dalabtay Naftayda Wuxuuna ku marag furay Marag ehelkeeda ah haduu Qamiiskiisu ka go'an yahay xagga hore iyadaa run sheegi isna waa Beenalaayaasha.

قَالَ هِيَ رَاوَدْتَنِي عَنْ نَفْسِيَّ وَشَهِدَ شَاهِدٌ مِّنْ اٰهْلِهَا اِنْ كَانَ قَمِيصُهُ وُقِدَتْ مِنْهُ فَبِئْسَ الْكٰذِبِيْنَ ﴿١٦﴾

27. Hadduu Qamiiskiisu ka go'an yahay xagga Danbana iyadaa Beenalaay ah isna (Yuusuf) wuxuu Ka mid yahay runlayaasha.

وَإِنْ كَانَ قَمِيصُهُ وُقِدَتْ مِنْهُ فَبِئْسَ الْكٰذِبِيْنَ ﴿١٧﴾

28. Markuu arkay ninkeedii Qamiiskii Yuusuf oo Gadaal ka go'an wuxuu yidhi kaasi waa Dhagartiinnii, Dhagartiinnuna waa wayn tahay.

فَلَمَّا رَا قَمِيصَهُ وُقِدَتْ مِنْهُ فَبِئْسَ الْكٰذِبِيْنَ ﴿١٨﴾

29. Yuusufow iskaga jeedso Xaalkan (ha ka waramin), Haweeneeyahay adna ka Dambi Dhaaf warso Eebe danbigaaga, waxaad kamid tahay Kuwa gafaye.

يُوْسُفُ اَعْرَضَ عَنْ هٰذَا وَاَسْتَغْفِرِيْ لِذٰلِكَ اِنَّكَ كُنْتِ مِنَ الْخٰطِئِيْنَ ﴿١٩﴾

Saasu Eebe u muujiyay ceeb iyo dnabi la'aanta Nabi Yuusuf iyo in iyadu Doontay isna diiday. Waxaana sidaas si Caddaalada ugu Marag furay cid Qaraabadeeda ka mida oo Qamiiska Nabi Yuusuf ku kala xukuntay hadduu horay ka Go'an yahay iyadaa run sheegi Hadduu Gadaal ka go'an yahayna isagaa run sheegi, Markuu ninkeedii Arkay inuu Qamiisku Gadaal ka go'an yahay oo Xaalku u Cadaaday Wuxuu ku tuhmaystay Haweenayda inay dhagar iyo khayaamo waddo, Dhagartooduna wayntahay, Wuxuuna u soo jeediyay Yuusuf inuu ka gaabsado Xaalkan kana warramin, iyadana wuxuu faray inay ka toobad keento arintaas ay doontay ee dhicin iyo Masabidka Yuusuf. Halkaasna ugama

Bannaana in cidu Yuusuf wax ka sheegto illeen wuxuu ahaa Nabi dhawrsoon oo sharafile sida Eebe cadeeyay. Markhaatiguna ama ha ahaado Cid guriga joogtay, ama Ilmo yar oo hadlay waxaase muhiim ah in Eebe bari yeelay Nabi Yuusuf, saasuuna Eebe ceebta uga Dhawraa Mu'miniinta is dhawrta iyaga iyo Ehelkoodaba, Waana qiso aad u xeel dheer. Yuusuf (26-29).

30. waxayna dheheen Haweenkii Magaalada Haweenaydii Casiis (Wasiirka) waxay dooni Khaadimkeeda Naftiisa (la nool) Jeceylkiisaa qalbiga ka galay, waxaana ku aragnaa Baadi cad.

﴿ وَقَالَ نِسْوَةٌ فِي الْمَدِينَةِ امْرَأَتُ الْعَزِيزِ تُرْوَدُ فَتَنْهَىٰ عَنْ نَفْسِهِ ۗ وَهِيَ تَشَفَّعُ لَهُمَا ۚ قَالَ اِنَّا لَنَرَاهَا فِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ ﴿٣٠﴾

31. markay maqashay dhagartooda (Xantoodii) way u fariin dirtay waxayna u darabtay fadhi (martiqaad) waxayna siisay mid kasta mindi waxayna ku tidhi Yuusuf ku soo bax markay arkeenna way wayneysteen waxayna iska gooyeen «Sareen» Gacmaha (Faraha) waxayna dheheen xaashaa Ilaah kani bashar (Dad) ma aha kani waxaan Malag sharaf leh ahayn ma aha.

﴿ فَلَمَّا سَمِعَتْ بِمَكْرِهِنَّ أَرْسَلَتْ إِلَيْهِنَّ وَأَعْتَدَتْ لَهُنَّ مُتَّكًا ۖ وَآتَتْ كُلَّ وَاحِدَةٍ مِّنْهُنَّ سِكِّينًا ۚ وَقَالَتِ اُخْرُجْ عَلَيْهِنَّ فَلَمَّارَأَيْتَهُنَّ أَكْبَرْتَهُنَّ وَقَطَّعْنَ أَيْدِيَهُنَّ وَقُلْنَ حَسْبُ لِلَّهِ مَا هَذَا بَشَرًا اِن هَذَا اِلَّا مَلَكٌ كَرِيمٌ ﴿٣١﴾

32. waxay tidhi kaasi waa waxaad igu dagaasheen anaa doonay Naftiisa wuuna is dhawray hadduusanse falin waxaan fari wallee waa la xabisi uu noqon kuwa dullooba.

﴿ قَالَتْ فَذَلِكُنَّ الَّذِي لُمْتُنِنِي فِيهِ وَلَقَدْ رُودْنُهُ ۖ عَنِ نَفْسِهِ ۗ فَاَسْتَعْصِمَ ۖ وَلَئِن لَّمْ يَفْعَلْ مَا ءَامُرُهُ لَيَفْعَلَنَّ ۚ وَلَيَكُونَنَّ مِنَ الصَّغِيرِينَ ﴿٣٢﴾

Waxaa magaaladi ku faafay warkii Haweeneydaas iyo Yuusuf, waxayna Haweenkii magaaladu ku sheekyesteen in Haweenaydii casiis oo ahaa Wasiir ay dooni Wiilkii guriggeda joogay Yuusuf, Jeceylkiisuna qalbiga ka galay, ayna ku sugantahay baadi cad, markay warkii iyo xantoodii maqashayna waxay u samysay martiqaad iyo wax la jarjaro waxayna u dhiibtay Mindiyo, Yuusufna waxay amartay inuu u soo baxo, markay arkeenna way la yaabeen oo waynaysteen oo Farihi iska sareen intay dhawridiisa mashquul ku ahaayeen, waxayna sheegeen inuusan Yuusuf Dad ahayn ee Malag sharfa badan yahay, markaasay iyagii ku soo jeedsatay oo ku tidhi wakaas waxaad igu dagaalayseen inaad idinba Faraha iska goyseen, Anaana doonay Naftiisa haddana haduusan falin waxaan fari waa la xabbisi oo noqon kuwa dullooba.

Halkaasna waxaa ka muuqda in cidii Eebe dhawro iyana is dhawrta Eebe ka fogayn xumaan iyo Ceeb, iyo Nadaafaddii Nabi Yuusuf iyo siday ugu caddaysay Haweenkii dhabta illeen Nabiyada Eebaa ilaaliyayey. Yuusuf (30-32).

33. wuxuuna yidhi (Nabi Yuusuf) Eebow Xabbis baan ka jeclahay waxay iigu yeedhi haddaadan iga iilan dhagartooda waan u iilan Xaggooda waxaana ka mid noqon Jaahiliinta.

﴿ قَالَ رَبِّ النَّبِيعُونَ أَحَبُّ إِلَيَّ مِمَّا يَدْعُونِي إِلَيْهِ ۖ وَلَا تَصْرِفْ عَنِّي كَيْدَهُنَّ أَصْبُ إِلَيْهِنَّ ۚ وَأَكُن مِّنَ الْجَاهِلِينَ ﴿٣٣﴾

34. waxaana ajiibay Eebihis wuuna ka iilay dhagartooda illeen Eebe waa Maqle og.

فَأَسْتَجَابَ لَهُ رَبُّهُ فَصَرَفَ عَنْهُ كَيْدَهُمْ إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٢٤﴾

35. markaasaa waxaa u muuqday intay arkeen aayaad (Calaamooyin) inay xidhaan tan iyo Muddo.

ثُمَّ بَدَأَ لَهُمْ مِنْ بَعْدِ مَا رَأَوْا الْآيَاتِ لَيْسَجْنُهُمْ ۖ فَتَآخَرُوا بِهَا ۚ وَرَأَوْهُم بِخُفْيَاتِ أُيُوتٍ بَدْرًا قَدِيدًا ۚ وَتَبَوَّءُوا لَهَا بُيُوتًا فَضُولًا ۚ لَا تُقَرَّبُ شَأْنٌ إِلَىٰ هُنَّ إِلَّا بِمِيزَانٍ يُنْزَلُ مِنْ سَمَاءٍ مُبِينَةٍ ۚ وَرَأَوْا كِسْفًا مِنَ النُّجُومِ نَسْفًا ۚ لَا يُفْصَلُ بَيْنَهُمْ وَهَاذِهِ ۚ بِمَا كَانُوا يَكْفُرُونَ ﴿٢٥﴾

36. waxaana la galay Xabbiska Laba dhalinyara ah midkoodbaana yidhi waxaan arkay (Riyo) anoo Miiri khamro, kii kalana wuxuu yidhi anna waxaan arkay anoo ku xambaari madaxayga korkiisa Khubus (kibis) kana cunayso shimbirtu xaggiisa nooga warran fasiiraadda waxaan kugu aragnaa inaad ka mid tahay sama falayaashee.

وَدَخَلَ مَعَهُ السِّجْنَ فَتَيَانٍ قَالَ أَحَدُهُمَا إِنِّي أَرَانِي أَعْصِرُ خَمْرًا وَقَالَ الْآخَرُ إِنِّي أَرَانِي أَحْمِلُ فَوْقَ رَأْسِي خُبْرًا تَأْتِي بِكُلِّ ظَلِيمٍ مِنْهُ نَيْتًا يَأْتِي أَوْلِيَاءَهُ ۖ إِنَّا نَرَاكَ مِنَ الْمُحْسِنِينَ ﴿٢٦﴾

Nabi Yuusuf sida caadada dadka wanaagsan tahay wuxuu Eebe ka baryey inuu ka koriyo dhagartooda naftiisana u iilan illeen waa Banii aadame, wuxuuna sheegay inuu xabbiska ka jecelyahay kana dooran waxay ugu yeedhi oo xumaana, intaas ka dibna waxay maslaxo moodeen Dadkii hogaaminayay halkaas in la xidho Nabi Yuusuf tan iyo muddo waana la xidhay, waxaana xabbiska la galay Labo Wiil oo dhalin yaro ah oo riyo arkay mid isagoo Khamra miiri, midna isagoo Khubus ama cunno madaxa ku xambaarsan shimbiruhuna wax ka cunayaan, waxayna warsadeen inuu u fasiro illeen waxay arkeen inuu Nin fiican yahaye, wayna imaan doontaa fasiiraaddii, Aayaduhuna waxay ku tusin Sharafkii Nabi Yuusuf iyo inuu xabbis ka dooran xumaan oo dhan, iyo Eebe la warsado Kaalmo iyo Dhawrid, iyo in Eebe ajiibo baryada Daka suuban, iyo dhagartay ku sameeyeen Nabi Yuusuf oo iyagoo og inuusan dambi lahayn ay haddana xidheen si ay u asturaan Haweeneyda sumcaddeeda, iyo siduu u yiqiin fasiiraadda Riyada looguna yaqiinnay wanaag iyo sharaf iyo akhlaaq wanaagba, Yuusuf (33-36).

37. wuxuu yidhi (Yuusuf) wixii cunna ah oo laydinku Arzaaqo waxaan idiinka warrami fasirkiiisa ka hor imaatinkiisa, kaasina waa waxaa Eebahay i baray, anuguna waxaan ka tagay (Nacay) milladda Qoomkaan rumaynayn Eebe oo aakhirana ka gaaloobay.

قَالَ لَا يَا أَبَتِ كَمَا طَعَّمْتُ زُرْقَانَهُ إِلَّا نَبَأْتُكُمَا بِتَأْوِيلِهِ ۚ قَبْلَ أَنْ يَأْتِيَكُمَا ذَلِكُمَا وَمَا عَلَّمَنِي رَبِّي إِنِّي تَرَكْتُ مِلَّةَ قَوْمٍ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَهُمْ بِالْآخِرَةِ هُمْ كَافِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. waxaana raacay milladda (Diinta) Aabayaalkay Ibraahiim, Isxaaq iyo Yacquub, Nuguma habboona inaan la wadaajinno Eebe cibaadada waxna, taasina waa fadliga Eebe ee korkannaga iyo Dadkaba, laakiin Dadka badankiisu kuma shugriyaan.

وَاتَّبَعْتُ مِلَّةَ آبَائِي إِبْرَاهِيمَ وَإِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ ۚ مَا كَانَ لَنَا أَنْ نُنْشِرَكَ بِاللَّهِ مِنْ شَيْءٍ ذَلِكُمْ مِنْ فَضْلِ اللَّهِ عَلَيْنَا وَعَلَى النَّاسِ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٣٨﴾

39. Saaxiibadayda Xabbiskow ma ilaahyo kala tagsan yaa khayrroon mise ilaah kaliya ee awoodda badan.

يَصْحَبِي السِّجْنَءَ أَزْيَابٌ مُتَفَرِّقُونَ خَيْرٌ أَمِ اللَّهُ
الْوَحْدُ الْقَهَّارُ ﴿٣٩﴾

40. ma caabudaysaan Eebe ka sokow waxaan magacyo aad magacowdeen ahayn idinka iyo Aabayaalkiin oon Eebe u soo dejinin xujo, xukunkana Eebe mooyee cid kale ma leh, wuxuuna faray inaydaan caabudin isaga mooyee, saasaana diinta toosana laakiin Dadka badankood ma oga.

مَا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِهِ إِلَّا أَسْمَاءُ سَمَّيْتُمُوهَا
أَنْتُمْ وَءَابَاؤُكُمْ مِمَّا أَنْزَلَ اللَّهُ بِهَا مِنْ سُلْطَانٍ إِنْ
الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ أَمَرَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ ذَلِكَ لِلَّذِينَ
الْقِسْمِ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٤٠﴾

Nabi yuusuf intuusan wali u fasinir riyaday warsadeen Labada will wuxuu uga hormariyey inuu Eebe ogaysiyey cunnada loo keeni waxay tahay, uu nacayna diinta kuwaan rumeyn Eebe iyo aakhirro oo ka gaaloobay, uu raacina Diintii Aabayaalkiis Nabi Ibraahim Nabi Isxaaq iyo Nabi Yacquub, waxaan Ilaahay ahayn ayan caabudayn. Taasina waa fadliga Eebe siiyey iyaga iyo dadkaba inkastoon dadka badankii ku shugrineyn Eebe, wuxuuna u sheegay in Eebe kaliya ka khayrroonyahay Ilaahyo badan oo kala tagsan, oo ah magacyo aan xujo lahayn ee layslka magacaabay, xukunkana Eebaa iska leh, wuxuuna faray in isaga uun la caabudo, saasaana Diinta toosana Dadka badankiise ma oga, markaas ka dib yuu u sheegay Warsigoodii. Yuusuf (37-40).

41. Saaxiibadayda xabbiskow midkiin wuxuu waraabin sayidkiisa khamro, kan kalase waa la wadhi (Dili) oy shimbriuhu ka cuni Madaxiisa, waana la xukumay amarkaad warsateen.

يَصْحَبِي السِّجْنَءَ أَمَّا أَحَدُكُمْ فَاسْتَقَىٰ رَبَّهُ رَحْمَةً
وَأَمَّا الْآخَرُ فَيُضَلُّ فَتَأْكُلُ الْأَطْيَرُ مِنْ رَاسِهِ
فُضِيَ الْأَمْرُ الَّذِي فِيهِ تَسْتَفْتِيَانِ ﴿٤١﴾

42. wuxuuna (Yuusuf) ku yidhi kii uu u Maleeyay inuu nabad gali oo midkooda igu sheeg Sayidkaaga agtiisa, Waxaase halmaansiyay Shaydaan Xusidda Eebihiis, wuxuuna (Yuusuf) ku Nagaaday Xabbiska Dhawr sano.

وَقَالَ لِلَّذِي ظَنَّ أَنَّهُ نَاجٍ مِنْهُمَا اذْكُرْ فِي عِنْدِ
رَبِّكَ فَإِنْسَسَهُ الشَّيْطَانُ ذِكْرَ رَبِّهِ فَلَبِثَ فِي
السِّجْنِ بِضْعَ سِنِينَ ﴿٤٢﴾

43. Xaakinkii wuxuu yidhi waxaan arkay Todobo sac oo Shilshilis oy cunayaan todobo Wayda, iyo Todobo sabuul oo cagaaran, iyo kuwo kaloo ingagan dad Yahaw iiga waarama Riyadayda hadaad Fasiri kartaan riyada.

وَقَالَ الْمَلِكُ إِنِّي أَرَىٰ سَبْعَ بَقَرَاتٍ سِمَانٍ
يَأْكُلْنَ سَبْعَ عِجَافٍ وَسَبْعَ سُنْبُلَاتٍ
خَضِرٍ وَأَخْرَ يَأْسِتُ بَنَاتُهُمَا الْمَلَائِقُوتِي فِي رُءُوسِي
إِنْ كُنْتُمْ لِلرُّءُوسِ يَاْتَعْبُرُونَ ﴿٤٣﴾

44. Waxay dhaheen waa qaraw anna-guna ma naqaanno Fasirka qarawyada «dhadhabka».

قَالُوا أَتَشْعُرُ أَحْلِيْمٌ وَمَا نَحْنُ بِتَأْوِيلِ الْأَحْلَامِ
بِعِلْمِهِ ﴿٤٤﴾

Nabi Yuusuf wuxuu u fasiray riyadii isagoo ku yidhi midna sayidkiisa yuu khamri waraabin oo bixi midna waa la dili oo shimbirtu madaxa ka cuni waana xaal dhammaaday, wuxuuna faray kii baxayey inuu xusuusiyo sayidkiisa xaalka Yuusuf wuuse halmaamay, saasuuna Yuusuf xabbiska ugu nagaaday dhawr sano, markaasaa xaakimkii arkay riyo ah Toddobo Sac oo shil shilis oy cuni Toddobo caata ah iyo Toddobo Sabuul oo cagaaran iyo kuwo kale oo ingagan, wuxuuna warsaday dadkii inay u fasaaran hadday garan fasiridda riyada, waxayse ugu jawaabeen inay tahay dhadhab iyo qarow iyana ayan aqoonin fasiraadda dhadhabka, waxaase soo socja in Yuusuf fasiri, Aayaduhuna waxay ku tusin inay waajib tahay in dadka wanaagga la faro meel kasta ood joogto iyo in diinta Xaqa ah isku mid tahay, iyo in laga fogaado jidka kuwa xun iyo in Eebe kaliya la caabudo illeen isagaa amarka iska lahe. Yuusufna Eebaa baray fasiridda riyada. Yuusuf (41-44).

45. wuxuu yidhi kii nabadgalay oo midkooda markuu xaxuustay muddo ka dib Anaa idiinka Warrami fsirkiisa ee i dira.

وَقَالَ الَّذِي نَجَّاهُمَا وَادَّكَرَ بَعْدَ أُمَّةٍ أَنَا أُنْتُمْ
بِتَأْوِيلِهِ فَأَرْسِلُونِ ﴿٤٥﴾

46. Wuxuu yidhi Yuusufow Saaxiibow nooga warran Toddoba sac oo Shilshilis oy cunayaan todobo Wayd ihi iyo todobo Sabuul oo cagaaran iyo kuwo ingagan oo kale inaan ula noqdo dadka inay ogaadaan.

يُوسُفُ أَيُّهَا الصِّدِّيقُ أَفْتِنَا فِي سَبْعِ بَقَرَاتٍ سِمَانٍ
يَأْكُلُهُنَّ سَبْعُ عِجَافٍ وَسَبْعِ سُنبُلَيْتٍ خُضْرٍ
وَأُخْرٍ يَأْكُلُهَا النَّاسُ وَتَعْلَمُ إِلَى النَّاسِ لَعَلَّهُمْ
يَعْلَمُونَ ﴿٤٦﴾

47. Waxuuna yidhi waxaad tacbanay-saan Todoba Sano oo israacsan ee waxaad goosataan ku daaya Sabuulkii-sa wax yarood cunaysaan mooyee.

قَالَ تَزْرَعُونَ سَبْعَ سِنِينَ دَابًا فَمَا حَصَدتُّ فَذَرُونِي
سُنبُلِيهِ إِلَّا قَلِيلًا مِمَّا تَأْكُلُونَ ﴿٤٧﴾

48. markaas waxaa imaan arrintaas ka dib Todobo daran (abaara) oo cuni waxaad hor marsateen wax yar ood kaydsateen mooyee.

تُرِيَانِي مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ سَبْعَ شَدَائِدٍ يَا كُنْ مَا قَدَّمْتُمْ لِي
إِلَّا قَلِيلًا مِمَّا تَخْتَصُمُونَ ﴿٤٨﴾

49. markaas ka dib waxaa imaan Sano loo gargaaro Dadka oo dhexdeeda ay wax miiran (Barwaaqo).

تُرِيَانِي مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ عَامٍ فِيهِ يُعَاقِبُ النَّاسُ
وَفِيهِ يَعْصِرُونَ ﴿٤٩﴾

Intaas ka dib kii nabad galay labadii Wiil yaa xusuustay Nabi Yuusuf iyo siduu u fasirayay Riyada wuxuuna codsaday in loo diro Yuusuf, waana loo diray, wuxuuna warsaday Xaalka todobada sac ee Shilis ee todobada caatada aha cunayso, iyo todobada Sabuul ee cagaaran iyo todobada ingagan wuxuuna u sheegay in Barwaaqo imaan markaas Abaaru dhici oy cuni wixii hore ee la kaydsaday ka dibna barwaaqo ka danbayn, wuxuuna usoo jeediyay inay wax kaydsadaan, Taasina Waxay ku tusin

sida Eebe Nabi yuusuf u baray Fasiraadda riyada iyo in Eebe Dadka ku imtixaamo barwaaqo iyo Abaarba, iyo wax la kaysado oo laga gaashaanto Dhibaataada inta la karo iyo in Eebe yahay Gargaaraha dadka Dhibban. Yuusuf (45-49).

50. wuxuu yidhi Xaakimkii ii keena Yuusuf markuu kii loo diray u yimidna wuxuu ku yidhi ku noqo Sayidkaaga oo warso muxuu ahaa Xaalkii haweenkii iska Saray farahooda Eebahay waa ogyahay Dhagartooda.

وَقَالَ الْمَلِكُ أَتُؤْتِيَنِي بِهِ فَمَا جَاءَهُ الرَّسُولُ قَالَ أَرْجِعْ إِلَىٰ رَبِّكَ فَسَعَلَهُ مَا بَالَ الْإِسْوَاءِ اللَّيِّ قَطَعَنَّ أَيَدِيَهُنَّ إِن رَّبِّي بِسَكِّدِهِنَّ عَلِيمٌ ﴿٥٠﴾

51. Wuxuu yidhi Xaakimkii xaalkiinu muxuu ahaa markaad doonteen Yuusuf naftiisa waxayna Dhaheen Eebaa xumaan ka nasahane kuma ogin xumaan, Waxayna tidhi Haweenaydii Wasiirka hadduu cadaaday Xaqii anaa dalbay Yuusuf naftiisa isaguna runbuu sheegi.

قَالَ مَا حَطَبُكُمْ إِذْ رَوَدْتُنَّ يُوسُفَ عَنْ نَفْسِهِ فُلْنٌ حَسَنٌ لِلَّهِ مَا عَلِمْنَا عَلَيْهِ مِنْ سُوءٍ قَالَتِ امْرَأَتُ الْعَزِيزِ إِنَّنِ حَصْحَصَ الْحَقُّ أَنَا رَوَدْتُهُ عَنْ نَفْسِهِ وَإِنَّهُ لَمِنَ الصَّادِقِينَ ﴿٥١﴾

52. Arrintaasna waa inuu ogaado inaanan Khayaamin isagoo maqan iyo inuusan Eebe toosinin dhagarta Khaa'imiinta.

ذَلِكَ لِيَعْلَمَ أَنِّي لَمْ أَخُنْهُ بِالْغَيْبِ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي كَيْدَ الْفَالِقِينَ ﴿٥٢﴾

53. mana bari yeelayo naftayda naftu waa farid badan tahay Xumaanta Naxariis Eebahay mooyee Eebahayna waa dambi dhaafe naxariista.

﴿وَمَا أَتَّبِعُ نَفْسِي إِذْ تَأْسَفُ لَأَمَارَةٌ بِالسُّوءِ إِلَّا مَآرِحَ رَبِّي﴾ إِنَّ رَبِّي بِغَفُورٍ رَحِيمٌ ﴿٥٣﴾

54. Wuxuu yidhi Xaakimkii ii keena Yuusuf gooni ha ii ahaadee (talinta) markuu La hadlayna wuxuu yidhi adigu maanta agtannada waxaad ku tahay Sharafle aamina.

وَقَالَ الْمَلِكُ أَتُؤْتِيَنِي بِهِ تَأْسَفُ لِنَفْسِي فَلَمَّا كَسَمَهُ قَالَ إِنَّكَ الْيَوْمَ لَدَيْنَا مَكِينٌ أَمِينٌ ﴿٥٤﴾

55. wuxuuna yidhi Yuusuf iga yeel Masuulka Khasnadaha dhulka waxaan ahay aamin cilmi lehe.

قَالَ اجْعَلْنِي عَلَىٰ خَزَائِنِ الْأَرْضِ إِنِّي حَفِيظٌ عَلَيْكُمْ ﴿٥٥﴾

Markay muuqatay Sharaftii iyo Aqoontii Nabi Yuusuf yuu Xaakimkii u cid diray In loo keeno, Yuusufse wuu soo celiyay fariintii isagoo warsan xaalkii Haweenkii Dhagrayay, Markuu Xaakimkii warsadayna waxay sheegeen inayna xumaan ku ogayn Yuusuf, markaas waxaa dhabtii sheegtay Haweenaydii wasiirka oo tidhi Hadduu xaqii cadaaday Anaa dalbay isna wa runle, Saasaana dhacday inuu Ogaado wasiirku inayna Khayaamo dhicin isagoo maqan, Eebana toosinayn Dhagarta Khaa'imiinta, mana bari yeelo naftayda, Naftuna waa xumaan fala cid Eebe u naxariisto mooyee, waana hadalkii Yuusuf, waxaana la sheegay inuu Noqon karo Hadalkii haweenayda, Xaakimkii wuxuu Yuusuf ka Dhigay la taliyihisa Gaarka, wuxuuna codsaday Nabi Yuusuf in laga dhigo Masuulka Khasnadaha Xoolaha ee dhulka masar illeen waa aamin Cilmi lehe.

Taasina waxay ku tusin samirkii nabi yuusuf, sida Eebe u bari yeeli Addoomadiisa suuban, in Xaqii caddaaday, inuusan Khaa'in liibaanayn, nafta khatarsanideeda, in Xaakimkii dhawastay Nabi Yuusuf, iyo inuu dalbay in loo Dhiibo Khasnadah dhulka illeen waa aamin cilmi lehe. Yuusuf (50-55).

56. saasaan u makaninay Yuusufdhulka (Masar) kagana tasarufi oo degi mees-huu doono, waxaan gaadhsiinnaa Naxariistanada cidaan doonno mana dhuminaynno Ajirka samo falayaasha.

وَكَذَلِكَ مَكَانَ يُوسُفَ فِي الْأَرْضِ يَتَّبِعُوا مِنْهَا حَيْثُ
يَشَاءُ نُصِيبُ بِرَحْمَتِنَا مَنْ نَشَاءُ وَلَا نَضِيعُ أَجْرَ
الْمُحْسِنِينَ ﴿٥٦﴾

57. Ajirka aakhiraana u khayrroon kuwa rumeeyey (Xaqa) oo ah kuwa dhawrsada.

وَالْأَجْرَ الْآخِرَ وَخَيْرَ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَكَانُوا
يَتَّقُونَ ﴿٥٧﴾

58. waxaana yimid Yuusuf Walaalihiis wayna u soo galeen wuuna aqoonsaday iyagoon garanayn.

وَجَاءَ إِخْوَهُ يُوسُفَ فَدَخَلُوا عَلَيْهِ فَعَرَفَهُمْ وَهُمْ
لَهُ مُنْكَرُونَ ﴿٥٨﴾

59. markuu darbay rarkoodii u (u oofiyeey miisiddii) wuxuu ku yidhi ii keena Walaalkiinna Aabbe miyeydaan arkayn inaan oofiyo Kaylka «miiska» ahayna mid dejin fiican.

وَلَمَّا حَزَنُوا مِنْهُمْ يَجْمَعُهُمْ قَالَ أَنَسُونِي بِأَخٍ لَكُمْ مِنَ
أَيُّكُمْ آلَتَرُونَ أَنِي أَوْفِي الْكَيْلِ وَأَنَا خَيْرُ الْمُنْزِلِينَ ﴿٥٩﴾

60. haddaydaan ii keeninna agtayda miisid kama helaysaan hana ii soo dhawaanina.

فَإِن لَّمْ تَأْتُونِي بِهِ ءَفَلَا كَيْلَ لَكُمْ عِنْدِي
وَلَا تَقْرَبُونَنِي ﴿٦٠﴾

61. waxay dheheen waannu ka dalbi Aabbihiis waana falaynaa (sidaas).

قَالُوا سُرُونَا مِنْهُ ءَابَاهُ وَإِنَّا لَفَاعِلُونَ ﴿٦١﴾

62. wuxuuna ka yidhi dhallinyaradiisii yeela alaabtooda (Badeecadooda) rarka dhexdiisa si ay u aqoonsadaan markay ku noqdaan Ehelkoodii inay soo noqdaan.

وَقَالَ لِفَتْيَانِهِ اجْعَلُوا بِضِعْمَتُمْ فِي رِحَالِهِمْ لَعَلَّهُمْ
يَعْرِفُونَهَا إِذَا انْقَلَبُوا إِلَىٰ أَهْلِهِمْ لَعَلَّهُمْ
يُرْجِعُونَ ﴿٦٢﴾

Eebe wuxuu makaniyeey Nabi Yuusuf dhulkii Masar siduu doono oo wanaagana u maamuli, Naxariista Eebana way gaadhaa cidduu doono, wanaagna Eebe ma dayaco, Ajirka aakhiraase u khayrroon kuwa xaqa rumeeyey ee dhawrsada, markaas ka dib waxaa Nabi Yuusuf uguymid socdaal Walaalihiis oos garan iyaguse ayan garanayn, markuu u dhameeyey rarkoodii iyo allabtay rabenna wuxuu ka doonay inay u keenaan Walaalkooda Aabbe, haddayna keeninna ayan ku soo noqonayn, iyagoo arka inuu u oofiyeey miisidda Ixtiraamayna, waxayna sheegeen inay aabbahood ka dalbi doonaan arrintaas, wuxuuna faray in badeecadday la yimaadeen loo dhexgaliyo rarka si ay u aqoonsadaan inaan waxba laga qaadan una soo noqdaan.

Suddi wuxuu sheegay: in la wariyeey in Nabi Yuusuf warsaday waxay rabeen, Aabahood, dalkay ka yimideen, intay yihiin iyo kii u yaraaye ku halaagsamay baadiye kii bahooda ahaana Aabbihiis la haday aadna u Jecelyahay, wuxuuna ugu jeclaa kii yaraa, markaasuu faray in la dhaqaaleeyo lana ixtiraamo. Yuusuf (56-62).

63. Kolkay u noqdeen Aabahood waxay dhaheen Aabaw waa naloo diiday Beegida (hadda kadib haduuna walaalkood raacin) ee nala dir Walaalkanno aan miisannee Annaguna waanu Ilaalin isagee.

فَلَمَّا رَجَعُوا إِلَىٰ آبِيهِمْ قَالُوا يَا أَبَانَا مَنَعَ مِنَّا
الْكَيْلَ فَأَرْسِلْ مَعَنَا آخَانَ نَكْتَلْ وَنَأْتَا
لَهُ لِحِفْظَتِهِ ﴿١٧﴾

64. Wuxuuna yidhi Miyaan idinku aamini karaa sidaan idiinku aaminay walaalkiis horay mooyee, Eebaa u khayrroon Dhawre waana Naxariis badane.

قَالَ هَلْ ءَامَنُكُمْ عَلَيْهِ إِلَّا كَمَا ءَامَنُكُمْ عَلَىٰ
آخِيهِ مِن قَبْلُ فَاِنَّهُ خَيْرٌ حَفِظًا وَهُوَ اَرْحَمُ
الرَّحِيْمِيْنَ ﴿١٨﴾

65. Markay fureen Alaabtoodii waxay ka heleen Badeecadoodii oo loo soo celiyay, Waxayna Dhaheen aabow maxaan rabnaa tani waa Badeecadeenii oo laynoo soo celiyay Waxaanu u Shamsanaynaa Ehelkeenna Waxaan ilaalinaynaa Walaalkanno waxaana kororsanaynaa miisid riti Taasina waa beegid sahlan.

وَلَمَّا فَتَحُوا مَتَاعَهُمْ وَجَدُوا بِضْعَتَهُمْ رُدَّتْ
إِلَيْهِمْ قَالُوا يَا أَبَانَا مَا نَبْغِي هَذِهِ بِضْعَتُنَا
رُدَّتْ إِلَيْنَا وَنَبْدِئُ أَهْلَنَا وَنَحْفَظُ آخَانَ وَزَادُوا
كَيْلَ بَعِيرٍ ذَلِكَ كَيْلَ يَسِيرٍ ﴿١٩﴾

66. Wuxuuna yidhi (Yacquub) idinla diri maayo intaad Ballan Eebe iga siisaan inaad iikeeaysaan wiilka in laydin koobo mooyee, markay siiyeen Ballankiina wuxuu yidhi Ilaahay waxaynu sheegi waa u Wakiil Shaahida.

قَالَ لَن أَرْسِلَهُ مَعَكُمْ حَتَّىٰ تُؤْتُونِ مَوْثِقًا مِّنَ
اللَّهِ لَأَمْتُنِي بِهِ إِلَّا أَن يُحَاطَ بِكُمْ فَلَمَّا ءَاتُوهُ
مَوْثِقَهُمْ قَالَ اللَّهُ عَلَىٰ مَا نَقُولُ وَكِيلٌ ﴿٢٠﴾

Way noqdeen waxayna Aabahood u Sheegeen in hadda ka dib loo diidi beegidda iyo inay ka soo masagaystaan Dhulka Masar hadayna walaalkood wadin, Waxayna ka codsadeen inuu la diro si ay iagana u ilaaliyaan Riti badar ah oo saa'id Ahna u helaan, Wuuse shakiyay oo ka cabsaday in sidii Yuusuf ku dhacdo, Waxayna arkeen Badeecadoodii oo loo soo Celiyay, waxayna dhaheen aabaw maxaa Inaga maqan waatan badeecadeenii waalaynoo soo celiyay, waana soo Badaraysannaynaa Walaalkanno waanu dhawri waxaanu korosan Riti wuxuuse yidhi Idinla diri maayo inaad ballan adag ijaqadaan mooyee inaad igu soo celinaysaan markay Ballan qaadeena wuxuu yidhi Eebaa u wakiila hadalkeenna.

Ibnu isxaaq wuxuu yidhi: wuxuu saas u yeelay waxaa lagama maarmaana inay Masagaystaan. Taasina waxay ku tusin in la digtoonaado Eebana lagu Xidhaado oo Wanaag la sugo. Yuusuf (63-66).

67. Wuxuu yidhi Wiilashaydow ha ka galina (Magaalada) irrid kaliya ee ka gala irido kala Tagsan, Waxna idiinkama tarayo xagga Eebe, Amarka cidaan Eebe ahayn maleh, isagaan talo saartay

وَقَالَ يَبْنَئِي لَأَتَدْعُوهُنَّ مِنْ بَابِ وَجْدٍ وَأَتَدْعُوهُنَّ
أَبْوَابَ مُنْفَرِقَةٍ وَمَا أَعْنِي عَنْكُمْ مِنَ اللَّهِ مِن شَيْءٍ
إِنَّ الْحُكْمَ إِلَّا لِلَّهِ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَعَلَيْهِ

isaga uun ha talo saarteen kuwa wax talo saaran.

فَلْيَسْأَلِ الْمُرْكُؤُونَ ﴿٦٧﴾

68. Markay ka galeen meeshuu faray Aabahood ma ahayn wax Eebe xagiisa wax uga tari ee waxay ahayd Dan Nafta (Nabi) Yacquub ku sugnayd oo uu Gutay, isaguna wuxuu ahaa mid cilmi leh oon Barray, dadka badankiise ma oga.

وَلَمَّا دَخَلُوا مِنْ حَيْثُ أَمَرَهُمْ أَبُوهُمْ مَا كَانَ يُغْنِي عَنْهُمْ
مِرَّةَ اللَّهِ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا حَاجَةٌ فِي نَفْسِ يَعْقُوبَ
فَضْبَهَا وَإِنَّهُ لَدُوعِلٍ لَمَّا عَلِمَتْهُ وَلَكِنْ
أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٦٨﴾

69. Markay u galeen Yuusuf wuxuu Dhaweeyay Walaalkiis Wuxuuna ku yidhi Anigu walaalkaaban ahay ee haka Murugoon Waxay faleen.

وَلَمَّا دَخَلُوا عَلَى يُوسُفَ أَوْجَى إِلَيْهِ آخَاةٌ قَالَ إِنَّي
أَنَا أَخُوكَ فَلَا تَبْتَئِسْ بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٦٩﴾

70. Markuu darbay Safarkoodii wuxuu yeelay Galaaskii walaalkii Rarkiisa, Markaas waxaa Dhawaaqay mid Dhawaaqi Safaryahaw Tuugaad Tihiiin.

فَلَمَّا جَهَرَهُمْ بِجَهَارِهِمْ جَعَلَ السَّيْفَايَةَ فِي رَحْلِ
أَخِيهِ ثُمَّ أَدْنَى مِنْهُ إِتْمَانًا لِيُعْرِضَ عَنْكَ
لَسَدِ قَوْمِ ﴿٧٠﴾

71. Waxayna dhaheen intay soo Qaabiileen maxaad waydeen.

فَالْوَأَقِبُوا وَعَالَيْهِمْ مَا ذَاتَقَفُّدُونَ ﴿٧١﴾

72. Waxayna dhaheen Saacii Xaakimka ciddii keentana wuxuu yeelan rar riti anaana kafiiil u ah.

فَالْوَأَقِفُّدُ صَوَاعِ الْمَلِكِ وَلَمَنْ جَاءَ بِهِ جَمَلٌ بَعِيرٍ
وَأَنَّا بِهِ رَعِيعٌ ﴿٧٢﴾

Nabi yacquub wuxuu ugu Naseexayay wiilashiisa inay ka galaan magaalada Irrido kala duwan, Amarkana Eebaa iska leh ee waa uun Dadaal, Eebaana kan la Talo saarto ah, Markay meeshii tageen waxay faleen siduu Aabahood Faray Inkastoon amarka Eebe cidna wax ka tarayn, Waxayse ahayd arrin Nabi Yacquub Doonay Wuxuuna Ahaa mid Eebe cilmi baray, Dadbadan baanse ogayn.

Markay magaaladii galeen wuxuu soo dhaweeyay walaalkii isuna sheegay inuu walaalkii yahay murugoonna waxaana la sameeyay si lagu soo reebo oo Galaaskii Boqorka yaa Alaabtisa la hexgaliyay, waxaana loogu Dhawaaqay safar yahaw Tuugaad tihiiin Markay warsadeen wax la waayayna waxaa loo Sheegay in la waayay Galaaskii Boqorka ciddii keentana ay heli rar riti oo ujuura ah Xaalkana Eebaa iska leh isagaana maamula, Waxaana waajiba in la rumeeyo xaqa laguna waano qaato Qisooyinka. Yuusuf (67-72).

73. waxayna dheheen Eebaan ku dhaaranaye waad ogtihiin inaanaan u imaanin inaan fasaadinno Dhulka Tuugana aanaan ahayn.

فَالْوَأَقِفُّدُ لَقَدْ عَلِمْتُمْ مَا جِئْنَا لِنُفْسِدَ فِي
الْأَرْضِ وَمَا كُنَّا سِرِّقِينَ ﴿٧٣﴾

74. waxayna dheheen (Qoomkii Yuusuf) waa maxay Abaalkiisu haddaad Been sheegaysaan.

فَالْوَأَقِفُّدُ جَزَاءُؤُهُ إِنْ كُنْتُمْ كَذِبِينَ ﴿٧٤﴾

75. waxay dheheen Abaalkiisu waa ruuxa laga helo rarkiisa saasaana ku abaal marinnaa Daalimiinta.

قَالُوا جَزَاءُ مَنْ وَجَدَ فِي رَحْلِهِ فَهُوَ جَزَاؤُهُ
كَذَلِكَ نَجْزِي الظَّالِمِينَ ﴿٧٥﴾

76. wuxuuna ka billaabay (Fatashihii Yuusuf) Alaabtoodii Walaalkii Alaabtiisa ka hor markaasuu ka soo bixiyey Weekii Walaalkiis, saasaana u baray kaydkaas yuusuf mana ahayn mid ku qaadan kara walaalkiis diinta Boqorka in Eebe doono mooyee, Waxaan kor yeelaa darajada ciddaan doono, Mid kastoo cilmi lehna waxaa ka Sarreeya cilmi badane (Eebe).

فَبَدَأَ بِأَوْعِيَّتِهِمْ قَبْلَ وَعَاءِ أَخِيهِ ثُمَّ اسْتَخْرَجَهَا
مِنْ وَعَاءِ أَخِيهِ كَذَلِكَ كِدْنَا لِيُوسُفَ مَا كَانَ
لِيَأْخُذَ أَخَاهُ فِي دِينِ الْمَلِكِ إِلَّا أَنْ يَشَاءَ اللَّهُ
نَرْفَعُ دَرَجَاتٍ مَن نَّشَاءُ وَفَوْقَ كُلِّ ذِي
عِلْمٍ عَلَيْهِ ﴿٧٦﴾

Waxay ku Dhaarteen Yuusuf Walaalihiis inay u iman inay fasaadiyaan Dhulka Tuugona ahayn iyagoo run sheegi, waxaase la warsaday Abaalka cidii laga Helo, waxayna sheegeen in isaga loo qaadan, Markaasaa la fatashay alaabtoodii Laguna Billaabay kuwii kale kadibna laga soo saaray Yuusuf Walaalkiis, waana Arrin Eebe baray Yuusuf si uu walaalkiis ula soo hadho, Mana suurawdeen inuu kula soo hadho Diinta boqorka dhulkaas masar, wuxuu Eebe doonase waa gaar, Eebana wuxuu kor yelaa ciduu doono Darajadiisa, Cid kastoo cilmi lehna Waxaa kasii sarreeya mid ka cilmi badan intuu cilmigu kaga Dhamaado Eebe.

Ibnu Cabbaas iyo Xasan Basari Waxa laga wariyay: mid cilmi badanba mid Kalaa ka sarreeya intuu cilmigu kaga dhamaado Eebe. Aayaduhuna waxay Tusin siday run u sheegeen Yuusuf walaalihiis iyo sida Eebe Yuusuf u baray Siduu Walaalkiis ula soo Hadhi lahaa iyo inaan Cidina Cilmi ku faani karin iyo in Eebe ciduu doono Darajeeyo, oo ah dadka Toosan ee Xaqa ku socda. Yuusuf (73-76).

77. waxayna dheheen (Yuusuf Walaalihiis) hadduu xaday waxaa xaday mar hore Walaalkiis, markaasuu Yuusuf u Qarsaday Naftiisa oosan u muujin. wuxuuna yidhi idinkaa ka shar badan Eebana waa ogyahay waxaad sheegeeysaan.

* قَالُوا إِن يَسْرِقْ فَقَدْ سَرَقَ أَخٌ لَّهُ مِنْ قَبْلُ
فَأَسْرَهَا يُوسُفَ فِي نَفْسِهِ وَلَوْ يُبَدِّهَا لَهُمْ قَالُ
أَنْتُمْ سَرَّكُمْ مَكَانًا وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا تَصِفُونَ ﴿٧٧﴾

78. waxayna dheheen wasirow wuxuu leeyahay (Wiilku) Aabbo wayn oo oday ah ee qaado midkanno badalkiisa waaxaan kugu aragnaa samo falee.

قَالُوا يَا أَبَا الْعَزِيزِ إِنَّ لَهُ وَأَبَا سَيْحَانَ كَيْدًا فَحَدِّ
أَحَدَنَا مَكَانَهُ وَإِنَّا نَرْتَكُ مِنَ الْمُحْسِنِينَ ﴿٧٨﴾

79. wuxuuna yidhi magan Eebe inaan qaadanno midkaan ka hellay alaabtannadii agtiisa mooyee, markaas daalimiinbaan noqonaynaa.

قَالَ مَعَاذَ اللَّهِ أَنْ نَأْخُذَ إِلَّا مَن وَجَدْنَا مَتَاعَنَا
عِنْدَهُ وَإِنَّا إِذًا لَطَّالِمُونَ ﴿٧٩﴾

80. markay ka quusteen yey kaliyoo-

فَلَمَّا اسْتَيْسَتْ سُورْمَتُهُ خَلَصُوا نَجِيًّا قَالَ

been iyagoo faqi, wuxuuna yidhi kii u waynaa waad otgihii in aabbihiin ballan adag idinka qaaday iyo inaad horay ugu xadgudubteen Yuusuf anugu dhulkan kama tagayo inta Aabbahay iga idmi ama Eebe i xukumi isagaa Xukun fiicane.

كَذَبُوا بِرُؤُوسِهِمْ لَقَدْ عَلِمُوا أَنَّهُمْ قَدْ أَخَذَ
عَلَيْكُمْ مَوَاقِفًا مِّنَ اللَّهِ وَمِن قَبْلُ مَا فَرَّطُكُمْ فِي
يُوسُفَ فَلَن أَبْرَحَ الْأَرْضَ حَتَّىٰ يَأْتِيَ لِي آيَاتُ الْوَعْدِ
اللَّهِ ۗ وَهُوَ خَيْرُ الْحَاكِمِينَ ﴿٨١﴾

Nabi Yuusuf Eebaa dhawray illeen Nabibuu ahaaye, sida Eebe u dhawray Nabiyada dhamaantood, saas darteed wax ma bi'inin sey sheegeen in hadduu kani wax xaday-waxna ma xadine; Walaalkiis yaa horay wax a xaday, Nabi Yuusufna hoos yuu ugu jawaaday inay yigu ka liitaan, markii Walaalkiis la soo reebay yey Cawdeen ooy sheegeen Aabbihiis inuu oday Gaboobay yahay oyna codsan in midkood lagu badalo waase laga diiday illeen ujeedadaa ahayd in la reebbe, markay quusteenna way faqeen, wuxuuna u soo Jeediyey kii u waynaa inay noqdaan iyagoo xusuusan waxay horay Yuusuf ugu faleen ballanna ay ka qaadeen inay kanna soo celin wuxuu u sheegay inuusan tagayn inta Aabbihiis ka idmi ama Eebe xukun fiican siin oo ah soo daynta Wiilka. Taasina waxay ku tusin in waxa qarsoon Eebe kaliya ogyahay tasarrufkana isagu iska leeyahay, wixii bannaan oo la fali karana la sameeyo markaas xaalka isaga loo bandhigo. Yuusuf (77-80).

81. wuxuuna ku yidhi ku noqda Aabbihiin waxaadna dhahdaan Aabbow Wiilkaagii wuu xaday, mana furaynno waxaan ogaannay mooyee, mana nihin kuwo waxa maqan ilaaliya (og).

أَتَجْعَلُ إِلَىٰ آيَاتِكُمْ فَتَقُولُوا يَا أَبَانَا إِنَّ لَنَا
سِرْفًا وَمَا شَهِدْنَا إِلَّا بِمَا عَلَّمْتَنَا وَمَا كُنَّا لَآلِئِ
الْغَيْبِ ﴿٨٢﴾

82. waydiina magaaladaan Joognay iyo safarkaana la soo noqonnay annaguna runbaannu sheegi.

وَسَلَّ الْقَرْيَةَ الَّتِي كُنَّا فِيهَا وَالْعِيرَ الَّتِي أَقْبَلْنَا
فِيهَا ۗ وَإِنَّا لَصَادِقُونَ ﴿٨٣﴾

83. wuxuuna yidhi saas ma aha ee waxay idiin qurxisay naftiinnu arrin (xaalkayguse) waa samir fiican wuxuu u dhawyahay Eebe inuu ii keeno dhammaan illeen isagaa oge falsan ehe.

قَالَ بَل سَأَلْتَهُ لَكُمُ أَنْفُسِكُمْ أَفَرَأْتُمْ
جَمِيلًا عَسَىٰ اللَّهُ أَن يَأْتِيَنِي بِهِمْ جَمِيعًا إِنَّهُ
هُوَ الْعَلِيمُ الْحَكِيمُ ﴿٨٤﴾

84. wuuna iskaga jeedsaday xaggooda wuxuuna yidhi walbahaarkay Yuusuf fow waxayna la caddaadeen indhihiisu Walbahaar wuxuuna noqday mid aad u tiiraanyaysan.

وَتَوَلَّىٰ عَنْهُمْ وَقَالَ يَا سَعْدَىٰ عَلَىٰ يُونُسَ
وَأَبْيَضَّتْ عَيْنَاهُ مِنَ الْحَزَنِ فَهُوَ كَظِيمٌ ﴿٨٥﴾

85. waxayna dheheen dhaar allee ma daynaysid sheegidda Yuusuf intaad ka tabar gabsid ama ka halaagsantid.

قَالُوا يَا اللَّهُ تَقَفْنَا أَن تَذَكُرَ يُونُسَ حَتَّىٰ تَسْكَونَ
حَرَضًا أَوْ تَكُونَ مِنَ الْهَالِكِينَ ﴿٨٦﴾

86. wuxuuna yidhi waxaan uun u

قَالَ إِنَّمَا أَشْكُو بَثِّي وَحُزْنِي إِلَى اللَّهِ وَأَعْلَمُ

sheegan xusnigayga iyo walbaharkayga Eebe, waxaana ka ogahay xagga Eebe waxydaan ogayn.

مِنَ اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٨٦﴾

Way noqdeen waxayna uga warrameen Aabahood xaalkii iyo waxay indhahooda ku arkeen aynase waxa qarsoon ogayn, runbayna sheegeen sidii u muuqatay, Aabbahoodse wuu ka aamin baxay oo ku tuhmay inay ku faleen siday horay Yuusuf ugu faleen wuxuuna Eebe ka rajeeyey inuu dhammaan u keeno, inkastoo indhuu la cadaadeen walbahaar, mase falin wax reeban illeen wuu uun walbahaaray waana arrin daran dhabtii, waxayse ugu sii dareen inay dhahaan Yuusuf magaciisa dayn maysid intaad ka jilicdo ama kadhimatid, wuxuuse u sheegayinuu Eebe uun u caban ogyahayna waxayna ogayn, Taasina waxay ku tusin in Eebe lagu kalsoonaado farajna laga sugo isagoo wixii la karo la fali. Yuusuf (81-86).

87. (Wuxuu yidhi Yacquub) Wilashayow taga oo soo daydaya (Warkii) Yuusuf iyo Walaalkiis hana ka quusanina naxariista Eebe (Farajkiisa) kama quusto farajka Eebe qoom gaala ah mooyee.

يَبْنَئِي أَذْهُبُوا فَحَسَبُوا مِن يُّوسُفَ وَأَخِيهِ
وَلَا تَأْتِسُوا مِن رُّوحِ اللَّهِ إِنَّهُ لَا يَأْتِسُ مِن
رُّوحِ اللَّهِ إِلَّا الْقَوْمُ الْكَافِرُونَ ﴿٨٧﴾

88. markay u soo galeen Yuusuf waxay dheheen Wasiiryahow waxaa na taabtay annaga iyo Ehelkanagaba dhib waxaana la nimid badeeco liidata ee noo oofi dhammee Beegidda nuguna sadaqayso ilaahay wuxuu abaal mariyaa kuwa sadaqaystee.

فَلَمَّا دَخَلُوا عَلَيْهِ قَالُوا يَا أَيُّهَا الْعَزِيزُ مَسَّنَا
وَأَهْلَنَا الضُّرُّ وَجِئْنَا بِبِضْعَةٍ مُّزْجَجَةٍ فَأَوْفِ
لَنَا الْكَيْلَ وَنَصَدِّقْ عَلَيْنَا إِنَّ اللَّهَ يَجْزِي
الْمُتَّصِدِّقِينَ ﴿٨٨﴾

89. wuxuuna ku yidhi ma ogtihiin waxaad ku fasheen Yuusuf iyo Walaalkiis idinkoo Jaahiliina.

قَالَ هَلْ عَلِمْتُمْ مَا قَعَلْتُمْ يُّوسُفَ وَأَخِيهِ
إِذْ أَنْتُمْ جَاهِلُونَ ﴿٨٩﴾

90. waxayna dheheen oo adugu ma Yuusuf baa tahay wuxuu yidhi anugu Yuusuf baan ahay kanna waa Walaalkay Eebaa nagu mannaystay (Kulmin) illeen ciddii ka dhawrsata Eebe oo samirta Eebe ma dayaco Ajirka samofalayaashee.

قَالُوا يَا نَكَّ لَأَنْتَ يُّوسُفُ قَالَ أَنَا يُوسُفُ وَهَذَا
أَخِي قَدْ مَنَّ اللَّهُ عَلَيْنَا إِنَّهُ مَن يَتَّقِ وَنَصِرَ فَإِنَّ
اللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُحْسِنِينَ ﴿٩٠﴾

91. waxay dheheen dhaar Eebe waxaa naga kiin doortay Eebe waana gafsannayn.

قَالُوا يَا لَلَّهِ لَقَدْ أَشْرَكَ اللَّهُ عَلَيْنَا وَإِنْ كُنَّا
لِخٰطِبِينَ ﴿٩١﴾

92. wuxuuna yidhi canaani korkiinna ma aha maanta, Eebe ha idiin dambi dhaafo isagaa Naxariis badane.

قَالَ لَا تَأْتِبِ عَلَيْهِ كُفْرُ الْيَوْمِ يَعْفُرُ اللَّهُ لَكُمْ
وَهُوَ أَرْحَمُ الرَّاحِمِينَ ﴿٩٢﴾

Nabi Yacquub wuxuu faray Wiilashiisii inay noqdaan soona warsadaan Yuusuf iyo Walaalkiis oyna ka qusannin farajka Eebe, illeen gaalaa ka quusatee, markay noqdeen way ku calaacaleen in dhibaato hayso badeeca liidataana ay wataan waxay ka codsadeen in loo samo falo loona masaggeeyo, markaas waxaa hadlay Yuusuf oo warsaday waxay ku faleen Yuusuf iyo Walaalkiis waxayna warsadeen inuu Yuusuf yahay, wuxuuna ugu jawaabay inuu Yuusuf yahay kanna Walaalkiis yahay, Eebana u samo falay illeen ciddii Eebe caabudda oo samirta Eebe ma dayacee, markaasay ku calaacaleen in Eebe ka doortay oyna gafsanaayeen, Yuusufse wuu iska saamaxay ugana dambi dhaaf dalbay Eebe una sheegay inaan canaanu maanta saarrayn, taasina waa caddaaladda Eebe iyo Awooddiisa iyo Naxariista Eebe iyo Fadligiisa iyo inuusan dayacayn Mu'miniinta caabudda oo samir iyo adkaysi la timaadda, tan kale waxay ku tusin Naxariis, isu turid, dhibaato ka fuduayn, isa saamixid iyo isuducayn. waanataas Akhlaaq iyo Wanaag iyo kala aarasho la'aan iyo in Eebe yahay meesha khayrku ka yimaaddo. Yuusuf (87-92).

93. la taga qamiiskaygan kuna tuura Wajiga Aabbahay ha noqdo mid wax arkee iina keena Eehlkiinna dhammaan.

أَذْهَبُوا بِقَمِيصِي هَذَا فَأَلْقُوهُ عَلَى وَجْهِ أَبِي
يَأْتِ بِصِيرًا وَأَوْفَىٰ بِأَهْلِكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿١٣﴾

94. markuu safarkii soo baxay wuxuu yidhi Aabbahood: anugu waxaan heli Yuusuf Dabayshiisii «Caraftiisii» had-daydaan i dhaliilayn.

وَلَمَّا فَصَلَتِ الْعِيرُ قَالَ أَبُوهُمْ إِنِّي لَأَجِدُ
رِيحَ يُونُسَ لَوْلَا إِنِّي مُتَيْدُونَ ﴿١٤﴾

95. waxayna dheheen adugu wali waa-xaad ku sugantahay gafkii hore, (Jacaylkii Yuusuf).

قَالُوا تَاللَّهِ إِنَّكَ لَفِي ضَلَالِكَ الْقَدِيمِ ﴿١٥﴾

96. markuu yimid kii bishaaraynayey wuxuu ku tuuray (Qamiiskii) Wajigiisa wuxuuna noqday mid wax arka, wuxuuna yidhi miyaanan idinku dhihin anugu waxaan ka ogahay xagga Eebe waxaydaan ogayn.

فَلَمَّا أَن جَاءَ الْبَشِيرُ أَلْقَاهُ عَلَىٰ وَجْهِهِ، فَارْتَدَّ
بَصِيرًا قَالَ أَرَأَيْتُمْ لَكُمْ إِنِّي أَعْلَمُ مِنَ اللَّهِ مَا
لَا تَعْلَمُونَ ﴿١٦﴾

97. waxayna dheheen: Aaboow nooga dhaafid warso dambigannaga waan gafsanayne.

قَالُوا يَا أَبَانَا اسْتَغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا إِنَّا كُنَّا خَاطِئِينَ ﴿١٧﴾

98. wuxuuna yidhi waan idiinka dambi dhaaf warsandoonaa Eebahay isagaa dambi dhaafe Naxariista ehe.

قَالَ سَوْفَ أَسْتَغْفِرُ لَكُمْ رَبِّي إِنَّهُ هُوَ الْغَفُورُ
الرَّحِيمُ ﴿١٨﴾

Wuxuu faray Yuusuf inay sii qaadaan Qamiiskiisa kuna tuuraan wajiga Aabihiis inuu wax arko, dadkiina u keenaan, Yacquubna wuxuu Eebe gaadhsiiyey dabayshii Yuusuf, wuxuuna u sheegay dadkii isagoo ka yaabi inay ku sheegaan cantatab iyo isku darsan, waxayna ku sheegeen inuu wali ku suganyahay jacaylkii Yuusuf ee darnaa, markaas waxaa u yimid kii bishaaraynayey wuxuuna Qamiiskii

ku tuuray Wajiga Aabbihiis waxna wuu arka, markaasuu ku yidhi miyaanaan idin dhihin waxaan ka ogahay xagga Eebe waxaydaan ogayn, waxayna qirteen gafkoodii waxayna warsadeen Aabbaahood inuu u dambi dhaaf warsado, wuxuuna u sheegay inuu u dambi dhaaf dalbi doono.

Ibnu mascuud wuxuu yidhi: wuxuu dib ugu dhigay tan iyo aroortii (oo ducada la aqbal), saasayna u dhabowday yididiladii Nabi Yacquub, Eebaana ka fayday Dhibkii hayay muddo dheer, Taasina waxay ku tusin Awoodda Eebe iyo inuu u Gargaaro addoomadiisa Suubban, kana faydo kurbada markay Dhab u rumeeyaan. Yuusuf (93-98).

99. Markay u galeen Yuusuf wuxuu isu dumay Labadiisii Waalid, Wuxuuna yidhi gala Masar Eebe hadduu Doono idinkoo aamina.

فَلَمَّا دَخَلُوا عَلَى يُوسُفَ ءَاوَجَّ إِلَىٰ آيَاتِهِ وَقَالَ
أَدْخُلُوا مِصْرَ إِن شَاءَ اللَّهُ ءَامِينَ ﴿١١﴾

100. Wuxuuna u koryeelay labada waalid Kursigii, Waxayna ula hoobteen Sujuud «Salaan», wuxuuna yidhi: Aabow waatan Fasirkii Riyadaydii horay, Wuxuu ka yeelay Eebahay Xaq (sugan) wuuna ii Wanaag falay Markuu iga soo Bixiyay Xabbiska idinkana keenay Baadiyaha Kadib intuu Shaydaan fasaadiyay ani iyo Walaalahay Dhexdannada, Eebahayna waa u turaha wuxuu Doono waana Oge falsan.

وَرَفَعَ آيَاتِهِ عَلَى الْعَرْشِ وَخَرُّوا لَهُ سُجَّدًا وَقَالَ
يَأْتِي هَذَا تَأْوِيلُ رُؤْيَايَ مِن قَبْلُ قَدْ جَعَلْتُ رَبِّي حَقًّا
وَقَدْ أَحْسَنَ بِي إِذْ أَخْرَجَنِي مِنَ السِّجْنِ وَجَاءَ بِكُمْ
مِنَ الْبَدْوِ مِن بَعْدِ أَنْ نَزَغَ الشَّيْطَانُ بَيْنِي وَبَيْنَ
إِخْوَتِي إِنَّ رَبِّي لَطِيفٌ لِّمَا يَشَاءُ إِنَّهُ هُوَ الْعَلِيمُ
الْحَكِيمُ ﴿١٣﴾

101. Eebow waxaad i siisay Xukun Waxaadna I bartay Fasiraadda riyada, Eebaha abuuray Samooyinka iyo Dhulkow adaa wali (Gargaare) ii ah Aduun iyo Aakhiroba ee i oofso anoo Muslim ah ina Haleeshii kuwa suubban.

* رَبِّ قَدْ ءَاتَيْتَنِي مِنَ الْمَلِكِ وَعَلَّمْتَنِي مِن
تَأْوِيلِ الْأَحَادِيثِ ؕ فَاطِرَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ
أَنْتَ وَلِيُّ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ ؕ تَوَفَّنِي مُسْلِمًا
وَالْحَقِّنِي بِالصَّلَاحِينَ ﴿١٥﴾

Eebaa wayn awoodna leh, Xaqiijiyayna riyadii nabi Yuusuf Dadkiisiina u soo Kulmiyay Xabbis iyo Dhibaato ka dib iyo Fasaadin Shaydaan isaga iyo Walaalihis Dhexdooda, Illeen Eebe waa u turaha u Naxariis badan cidduu Doono, Waana wax walba Oge falsan, Markaasuu Nabi Yuusuf ujeedsaday Xagga Eebe Xusayna Nimacda Eebe siiyay Wuxuuna ka baryay Eebaha Awoodda leh ee Cirka iyo Dhulka Abuuray ee Gargaaraha u ah Adduun iyo Aakhiraba inuu ku Dilo Muslinnimo Haleeshiyana Kuwii Suubbanaa.

Aayaduhuna waxay Tusin in Eebe faydo Dhibka iyo Cidhiidhiga, Suu u Kulmiyo Wax kala tagsan, in Nicmo Adduun ayan waarayn, in Eebe Yahay Gargaaraha Mu'miniinta, in la warsado Khaatimo Fiican iyo ku Dilid Diinta islaamka, Iyo inuu Wehel uga yeelo Dadkii Suubbanaa. Waxayna ku tusin in marka xaal Taam noqdo ku xigi Nuqsaan oo Adduun lagu Waarayn, Ruuxa Caqliga Badanna uu Xusuusnaado Xaalkii Nabi Yuusuf iyo Xukunkiisii iyo Siduu Eebe uga Baryay Khaatimo Fiican, Eebe ha nagu Khatimo Khaatimo Fiican. Yuusuf (99-101).

102. Kaasi waa wararka wax Maqan Annagaana Kuu Waxyoon, Mana aa-

ذَلِكَ مِنْ أَنْبَاءِ الْغَيْبِ نُوحِيهِ إِلَيْكَ وَمَا كُنْتَ

dan ahayn Agtooda Markay kulmiyeen Amarkoodii iyagoo Shirqooli.

لَدَيْهِمْ إِذَا أَجْمَعُوا أَمْرَهُمْ وَهُمْ يَمْكُرُونَ ﴿١٢﴾

103. Dadka badankiisna ma Rumay-nayaan aad kuba Dadaashide.

وَمَا أَكْثَرُ النَّاسِ وَلَوْ حَرَصْتَ بِمُؤْمِنِينَ ﴿١٣﴾

104. Wax ujuura ahna kama Warsanay-sid (Xaqa) waa uun waanada Caalam-ka.

وَمَا نَسَأْتُهُمْ عَلَيْهِ مِنْ آجْرٍ إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ لِلْعَالَمِينَ ﴿١٤﴾

105. Badanaa Calaamad samooyinka iyo Dhulka oo ay Marayaan iyagoo ka Jeedsan.

وَكَيْفَ يَنْفَعُ مِنَ آيَةِ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ يَمُرُّونَ عَلَيْهَا وَهُمْ عَنْهَا مُعْرِضُونَ ﴿١٥﴾

106. Mana rumaynayaan Badankoodu Eebe iyagoo la Wadaajin mooyee.

وَمَا يُؤْمِنُ أَكْثَرُهُمْ بِاللَّهِ إِلَّا وَهُمْ مُشْرِكُونَ ﴿١٦﴾

107. Ma waxay ka Aammin noqdeen inay u timaado Masiibo Cadaabka Eebe ama ugu Timaado Saacaddu Kado iyogoo ogayn.

أَفَأَمْسُوا أَنْ تَأْتِيَهُمْ غَيْشَةٌ مِنْ عَذَابِ اللَّهِ أَوْ تَأْتِيَهُمْ السَّاعَةُ بَغْتَةً وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿١٧﴾

108. Dheh tan waa waddadayda (xaqa ah) Waxaana ugu yeedhi (dadka) Xag-ga Eebe anoo Ku sugan Xujo cad aniga iyo inta i raacda, Waxaana Nasahay Eebe, kamidna ma ihi Mushrikiinta.

قُلْ هَذِهِ سَبِيلِي أَدْعُو إِلَى اللَّهِ عَلَى بَصِيرَةٍ أَنَا وَمَنِ اتَّبَعِيَ وَسَبِّحْ لِلَّهِ وَمَا أَنَا مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿١٨﴾

Waxaa la soo Sheegay oo Qisada yuusuf ah Waa wax maqnaa oo Eebe u Waxyooday Nabiga, mana La joogin Markay u kulmayeen Dhagarta, Dadka badankiina Si kastoo loogu dadaalo ma Rumeeyo Xaqa, Nabiguna wax ujuura ah Ma warsanayn gaadhsiinta xaqa, ee Quraanku waa Waanada caalamka, Waxaana badan intay Marayaan Calaamado Cirka iyo Dhulka ayna ku waano Qaadanyan ee ay iska mari kana Jeedsadaan. Wax badan oo ka midana waxay isku Daraan Rumayn Eebe iyo la wadaajis Cibaadadiisa.

Wax habboonna ma aha in Eebe wax kale, Wuxuu dooni ha ahaadee, wax lala Wadaajiyi, sida baryada, wax tarka, kaalmaha iwm, illeen Aammin Lagama aha inay masiibo timaado ama saacaddu kado ugu timaado dadka, Tan kale Diintu waa Caddahay waana jidka xaqa, een Qallooc lahayn, Nabiga iyo inta raacadayna way ku hanuuniyaan Dadka iyagoo ku cilmi leh oo toosan, Kana fog jidka Gaalada, waana in Xaqa la rumeeyo, looguna yeedho dadka si Cad oo Wanaag iyo Asluub ku Dheehantahay oo loo Cilmi leeyahay xaqa. Yuusuf (102-108).

109. Ma ahayn kuwii aan diray hortaa waxaan Rag loo Waxyoodo ahayn oo Ehelka Magaaloooyinka ah, miyayna soconnin Dhulka oo ay Fiiriyaan siday noqotay Cidhibta Kuwii ka horreeyay, Daarta Aakhiro yaana u khayrroon

وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ إِلَّا رِجَالًا نُوْحٍ إِيَّاهُمْ مِنْ أَهْلِ الْقُرَىٰ أَفَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرُوا كَيْفَ كَانَتْ عَاقِبَةُ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَلَدَارُ الْآخِرَةِ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ اتَّقَوْا أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿١٩﴾

kuwii Dhawrsaday ee Miyaydaan ka-sayn.


110. markay Quusteen Rasuuladii una Maleeyeen in la beeniyay waxaa U yimaadda gargaarkannaga waxaana korinaynaa cidaan doono lagamana celiyo Ciqaabtannada Qoomka Danbiilayaasha ah.

حَتَّىٰ إِذَا اسْتَيْسَسَ الرُّسُلُ وَطِمُوا أَنهَمُ قَدْ
كُذِّبُوا جَاءَهُمْ نَصْرًا فَتَمَّجِيَ مَنْ نَشَاءُ وَلَا يَرَدُ
بِأَسْئَاعِنِ الْقَوْمِ الْمُجْرِمِينَ ﴿١١٠﴾

111. Waxaa ugu sugan Qisadooda waano Kuwa Caqliga leh, mana aha Sheeko la Been abuurtay Waase u rumayn wixii ka horreeyay (oo Kutubtii Xaqa ahayda) iyo Caddaynta Wax kasta iyo Hanuunka iyo Naxariista Ciddii Rumayn Xaqa.

لَقَدْ كَانَ فِي قَصَصِهِمْ عِبْرَةٌ لِأُولِي الْأَلْبَابِ مَا كَانَ
حَدِيثًا يُنْفِرِي وَلَا يَكُنُ صَدَقَاتٍ الَّذِينَ بَيْنَ يَدَيْهِ
وَتَفْصِيلَ كُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً لِّقَوْمٍ
يُؤْمِنُونَ ﴿١١١﴾

Eebe wuxuu diray Nabi Maxamed hortisa (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Rasuullo loo waxyooday, ee Dadku waa inay Dhulka maraan ee Waano Qaataan siday Cidhibtii Kuwii hore Aakhiraana u Khayrroon Kuwa Dhawrsada, Tan kale markay Rasuulladii ka Quusteen rumaynta Qoomkoodii oo la Beeniyay yaa Waxaa u imaanayay Gargaarkii Eebe, Markaasuu Korinaayey Cidda uu doono, Wax Ciqaabta Eebe kuwa danbiilayaasha ah ka Celinna ma Jiro, Qisoooyinkaa la soo Sheegayna waanaa ugu Sugan Ciddii Caqli leh, Mana aha War la iska been abuuray, Waase urumayn xaqii ka Horreeyay, iyo Caddaynta Wax Kasta iyo hanuunka iyo Naxariista ciddii Rumayn Xaqa. Saasayna ku Dhammaatay Suuraddii iyadoo kulmisay Wax badan oo Qisadii Nabi Yuusuf iyo Xigmooyin kalaba, waxaase waajiba in Lagu Waano Qaato siday Suuraduba ku Dhammaatay, Lana rumeeyo Xaqa, Eebana loo kali yeelo Cibaadada, lana Sugo Gargaarka Eebe, Lana ogaado Xaqnimada Quraanka, Wanaagga iyo Xaqana loogu Yeedho Dadka, Guud ahaan Eebe si Dhaba loo Rumeeyo. Yuusuf (109-111).



Suurat Ar-Racd



Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Xarfaha hore oo kale waan soo Sheegnay Fasirkooda, Kuwaasna waa Aayaadkii Kitaabka (Quraanka), Waxaa lagaaga soo Dejiyay xagga Eebahaa waana Xaq Dadka Badankiise ma Rumaynin.

الْمَرْءُ تِلْكَ آيَاتُ الْكِتَابِ وَالَّذِي أُنزِلَ إِلَيْكَ مِنْ رَبِّكَ الْحَقُّ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١﴾

2. Eebe waa kan koryeela Samooyinka Tiir La'aan aad Aragtaan Markaas ka kornoqday carshiga, (Si u cunanta), Sakhirayna Qorraxda iyo Dayaxa Dhammaanna waxay ku socdaan Mud-do magacaaban, Eebaa maamula amarka Caddeeyana aayaadka Inaad la kulanka Eebihin yaqiinsataan.

اللَّهُ الَّذِي رَفَعَ السَّمَوَاتِ بِغَيْرِ عَمَدٍ تَرَوْنَهَا ثُمَّ أَسْوَأَ عَلَى الْعَرْشِ وَسَخَّرَ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ كُلٌّ يَجْرِي لِأَجَلٍ مُّسَمًّى يُدَبِّرُ الْأَمْرَ يُفَصِّلُ الْآيَاتِ لَعَلَّكُمْ بِلِقَاءِ رَبِّكُمْ تُوقِنُونَ ﴿٢﴾

3. Eebe waa kan Fidiyay Dhulka Yeelayna Dhexdiisa buuro, iyo wabiyo Midho kastana ka yeelay Dhexdiisa laba nooc Wuxuuna ku Dadaa Habeenkii Maalinta, Arrintaasna Calaamooyin yaa ugu Sugan Ciddii fikiri.

وَهُوَ الَّذِي مَدَّ الْأَرْضَ وَجَعَلَ فِيهَا رِيسًا وَأَنْهَارًا وَكُلٌّ مِنَ الثَّمَرَاتِ جَعَلَ فِيهَا رِجْسًا لِنَفْسٍ النَّيْلِ النَّهَارَ لِمَنْ فِي ذَلِكَ آيَاتٍ لِقَوْمٍ يَعْتَكِرُونَ ﴿٣﴾

Suuradaha lagu Billaabay Xarfahaas oo kale waxay ku tusin Sida Eebe Quraanka Ugu gargaaray iyo xaq iyo Waynida Quraanka, Aayadahanna waxay ku Tusin in Quraanku xaq Eebe soo Dejiyay yahay, inkastoo Dadka badankii Rumaynin, Ilaaha Quraanka soo Dejiyayna waa kan koryeelay Samooyinka tiir La'aantiis.

kana kornoqday carshiga si u cunanta hallayn la'aan iyo u ekaynsiin la'aan Sahlayna Qorraxda iyo Dayaxa, muddo ay ku socdaana uyeelay, Amarkana isagaa Maamula, Caddeeyana Aayaadka inaad la kulanka Ilaahiina rumaysaan, waana Kan Dhulka fidiyay, buuro, wabiyo, iyo Nooc kastoo midha ahna yeelay, Habeenka iyo Maalintana isku badala si ay Calaamo ugu Noqoto ciddii Fikiri.

Taasina waxay ku Tusin in Eebe Maamulo Adduunka sare iyo Hoosaba, Awooddiisuna wax la Qiyaasi karo Ahayn, Mudanna cibaado Dhaba iyo Aqoonsi. Ar-Racd (1-3).

4. Dhulka waxaa ah Goosinno daris ah

وَفِي الْأَرْضِ قِطْعٌ مِّنْ مَّجْدَرَاتٍ وَجَعَلْنَا مِنْ أَعْيُنِ

(isku dhaw) iyo Bustaan Cinaba iyo Beer iyo Timir oo Mataano ah iyo kuwo aan Mataano ahayn, laguna Waraabiyo Biyo kaliya Waxaana ku kala Fadilaynaa (Wanaajinaynaa) qaar qaarka kale Cunnada (Dhadhanka) Arrintaasna Calaamaa ugu Sugaan Ciddii Wax kasi.

وَرَزَقٌ وَنَخِيلٌ صِنَوَانٌ وَعَدْرٌ صِنَوَانٌ يُسْقَى بِمَاءٍ وَحِدٍ وَنُقْطَلٌ بَعْضُهَا عَلَى بَعْضٍ فِي الْأَكْثَلِ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٤﴾

5. Haddaad yaabtana waxaa Yaaba Hadalkoodii Ahaa ma Markaan noqonno Carro yaa Markaas Abuur Cusub (Nala abuuri) Kuwaasi waa kuwa Ka Galoobay Eebahood waana Kuwa Luquntooda la Yeelay Katiinado waana kuwo Naarta Ehelkeeda ah Kuna Dhex waari.

* وَإِنْ تَعَجَّبَ فَعَجَبٌ قَوْلُهُمْ أَءِذَا كُنَّا تُرَابًا أَوْنَا لَفِي حَاتِبٍ حَدِيدٍ أَوَّلَيْكَ الَّذِينَ كَفَرُوا بَرِّهِمْ وَأَوَّلَيْكَ الْأَعْتَلُ فِي أَعْتَابِهِمْ وَأَوَّلَيْكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٥﴾

6. Waxayna kaa Dedejisan Xumaan wanaag ka hor Iyadooy Tagtay Hortood tusaalayaal (ciqaabeed) Eebahaana waa u dambi Dhaafaha dadka iyagoo Dulmi ku sugan Eebahaana waa Cigaab darane.

وَيَسْتَعْجِلُونَكَ بِالسَّيِّئَةِ قَبْلَ الْحَسَنَةِ وَقَدْ خَلَّتْ مِنْ قَبْلِهِمُ الْمُثَلُوتُ وَإِنَّ رَبَّكَ لَذُو مَعْفَرَةٍ لِلنَّاسِ عَلَى ظُلْمِهِمْ وَإِنَّ رَبَّكَ لَشَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿٦﴾

Aayaduhuna waxay ka warrami Qudrada Eebe iyo Awooddiisa iyo Midhaha isu Dhaw ee Biyo kaliya ka waraaba Hadana kala Duwanyahay Dhadhankoodu, Midabkoodu, adaygga, Jileeca, waynida, yaraanta, Waxaasoo Dhanna waxay ku tusin Awoodda iyo Maamulka Eebe ay Kuwaan Qaadan Ciddii wax kasi, Yaan ilaahay ahayn oo saas Yeeli kara, Aaway kuwii Caqli xumaa ee lahaa Dabeecadbaa wax Fasha, waa layaab Waxaase la yaab isna ah inay Gaaladu Cuslaystaan in Markay Dhintaan oy Carro Noqdaan La soo celin markale, Kuwaasu waa kuwa Eebe Ka gaaloobay ee luqunta Laga xidhi waana Kuwo ku waari, ee dadajista Cigaab iyo Dhibaato Wanaag ka hor, Hortoodana waxaa ahaa wax lagu waano qaato oo Cigaaba, Eebase wuu isaga Danbi Dhafaa iyagoo Dulmi fali, Cigaabtiisuna way darantahay. Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Saamaxa Eebe la'aantii iyo Dhaafiddiisu cidna Nolol Kuma xasisheen, Cigaabtiisuna hadayna Jirin cid Kasta Way Talo saaran lahayd. Waxaa wariyay Ibnu abii Xaetim, Saas Darteed waa in La waano qaato Wanaaggana lagu dadaalo, Xaaraantana laga fagaado. Ar-Racd (4-6).

7. waxay dheheen kuwii gaaloobay maxaa loogu soo Dejin waayey korkiisa Aayad xagga Eebihis ka timid, adugu waxaad uun tahay Dige cid kastana waxay leedahay Hanuuniye.

وَيَقُولُ الَّذِينَ كَفَرُوا لَوْلَا نُزِّلَ عَلَيْهِ آيَةٌ مِنْ رَبِّهِ إِنَّمَا أَنْتَ مُنذِرٌ وَلِكُلِّ قَوْمٍ هَادٍ ﴿٧﴾

8. Eebaa og waxay ku siddo uurka Dhaddig kasta, iyo waxay Ilmo galleennadu Nusqaamin, iyo waxay kordhin

إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا تَحْمِلُ كُلُّ أُنْثَىٰ وَمَا تَغِيصُ الْأَرْحَامُ وَمَا تَزَادُ وَكُلُّ شَيْءٍ عِنْدَهُ بِمِقْدَارٍ ﴿٨﴾

(Dhiciis iyo Shin) wax kastana Eebe agtiisa Qaddar (Waqti) yuu leeyahay.

9. wuxuuna ogyahay wax maqan iyo waxa jooga waana weyne ka sarreeya (wax kasta).

10. waana isku mid kiinna qarsada hadalka iyo kiinna la qaylya, iyo kii isqariya hebeenkii iyo kii muuqda Maa-lintii.

11. wuxuuna leeyahay (Ruux kasta) kuwo isbedela (Malaa'ig) oo hortiisa iyo Gadaashiisa ah kuna dhawra amarka Eebe, Ilaahayna ma dooriyo wax dad ku suganyahay intay ka dooriyaan waxa naftooda ku sugan, markuu Eebe la doono Dad dhibna wax ka celin ma jiro, mana laha Eebe ka sokow Gar-gaare.

Waxbadan yey Gaaladii warsadeen Aayado Kibir iyo isla wayni darteed, Nabiguse waa uun u Dige'cidkastana waxay leedahay Hanuuniye.

Tan kale Eebaa wax walba og, waxa Urka ku jira, waxa dhiciis noqon waxa Shin ku dhalan, wax walbana Waqti bay ku leeyihiin Eebe agtiisa, wuuna ogyahay waxa maqan iyo waxa jooga, waana waynaha sarreeya, waana isugu mid Eebe ciddii wax qarsata iyo tii Habeen la gabata iyo tii Maalin Muujisata, ruux walbana Malaa'igbaa hortiisa iyo Gadaashiisa ku dhawrta Idinka Eebe, Sunnada Eebana waa inaan cidna laga doorinin siday ku sugantahay haddayna doorinin waxa Naftoodu kusugan cidduu Eebe xumaan la doonana wax ka celin ama gargaari ma jiro.

Waxaana sugnaaday in Malaa'igtu isukeen Beddesho Habeen iyo Maalin, saasyna u habboontahay in xumaanta laga dhawrsado wanaagana lagu dadaalo, Eebana la cuskado. Ar-Racd (7-11).

12. Eebe waa kan idin tusiya Hillaaca cabsi gelin iyo rajo gelin darteed, wuxuuna abuuraa daruurta culus.

13. wuxuuna la tasbiixsadaa onkadku Mahadda Eebe ku dheehan iyo Malaa'igtuna (waxay la tasbiixsan) Cabsida Eebe, wuxuuna diraa Danabyo wuxuuna ku ridaa cidduu doono, iya-guna waxay ku murmi Eebe isagoo ciqaabtiisu darantahay.

14. Eebe waxaa u Sugnaaday Baryo (iyo Cibaado) Xaqa, waxa ka soo hadhayna

عَلَيْهِ الْعَيْبِ وَالشَّهَادَةِ الْكَبِيرِ الْمُتَعَالِ ﴿١٠﴾

سَوَاءٌ مِنْكُمْ مَنْ أَسْرَأَ الْقَوْلَ وَمَنْ جَهَرَ بِهِ
وَمَنْ هُوَ مُسْتَخْفٍ بِاللَّيْلِ وَسَارِبٌ بِالنَّهَارِ ﴿١١﴾

لَهُرَّ مُعَقَّبَتٌ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِ
يَحْفَظُونَهُ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّى
يُغَيِّرُوا مَا بِأَنْفُسِهِمْ وَإِذَا أَرَادَ اللَّهُ بِقَوْمٍ سُوءًا
فَلَا مَرَدَ لَهُ وَمَا لَهُمْ مِنْ دُونِهِ مِنْ آلٍ ﴿١٢﴾

هُوَ الَّذِي يُرِيكُمْ أَلْبَاقَكُمْ حَقًّا وَطَمَعًا وَيُنشِئُ
السَّحَابَ الثِّقَالَ ﴿١٣﴾

وَيَسْخِرُ الرِّعْدُ بِحَمْدِهِ وَالْمَلَكُ مِنْ خِيفَتِهِ
وَيُرْسِلُ الصَّوَاعِقَ فَيُصِيبُ بِهَا مَنْ يَشَاءُ وَهُمْ
يُجَادِلُونَ فِي اللَّهِ وَهُوَ شَدِيدُ الْمِحَالِ ﴿١٤﴾

لَهُ دَعْوَةُ الْحَقِّ وَالَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ لَا يَسْمَعُونَ لَهُمْ

waxba uma ajiibaan (kuwa baryi) sida mid ku fidiyey Gacmihiisa Xagga Biyaha inay Afkiisa gaadhaan, mana gaadhayaan, Baryada Gaaladuna waxaan baadi ahayn ma aha.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ
يَسْأَلُكَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِمَ يُعَذِّبُهُمُ اللَّهُ بِأَسْمَائِهِمْ وَتَعَذِّبَهُمُ اللَّهُ وَاللَّهُ يَسْجُدُ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوْعًا وَكَرْهًا
وَيُظَلِّلُهُم بِكَلْبَدٍ وَالْأَصْوَابِ ﴿۱۴﴾

15. waxaa Ilaahay u Sujuuda «u khu-duuca» waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka Ogolaansho iyo Qasab iyo Hooskooda aroor iyo Galbihiiba.

وَاللَّهُ يَسْجُدُ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوْعًا وَكَرْهًا
وَيُظَلِّلُهُم بِكَلْبَدٍ وَالْأَصْوَابِ ﴿۱۵﴾

Eebe waa kan awoodda badan ee Dadka tusiya Hillaac Cabsi gelin iyo Damac galin, Abuurana daruur culus, lana tasbiixsado Onkadku iyo Malaa'igtu dartiis, dirana danabyada cidduu doonana ku rida, Gaaladuna waxay ku murmi Eebe isagoo Ciqaabtiisu darantahay, Eebana wuxuu mudan yahay Cibaado Xaq ah isagaana baryo mudan, waxay baryi Eebe ka sokowna waxay la mid yihiin ruux Gacmaha Biyaha ku taagay inay soo gaadhaan Afkiisa mana suurowdo, Gaalada baryadeeduna waa Baadi wax kama jiraana, waxa Cirka iyo Dhulka ku sugana Eebay u Khuduucan Ogolaansho iyo Qasabba oo cid Abuurid, Doorsoon, Cudur, Geeri iyo Maamulka Eebe diidi karta ma jirto. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Haddaad Maqashaan onkodka Eebe Xusa, kuma dhoco cid Eebe xusiye, waxaa wariyey Dhabaraani. Dhabtuna waa in Eebe Xaq yahay, Nabgiuna Xaq yahay, Diintuna Xaq tahay, Qiyaamo iyo Xisaab iyo Janno Naarna wax sugan yihiin lana rabo Darbasha iyo samo fal. Ar-Racd (12-15).

16. waxaad dhahdaa yaa ah Eebaha Samooyinka iyo Dhulka, waxaadna dhahdaa waa Eebe, waxaadna dhahdaa ma yeelanaysaan Eebe ka sokow Awliyo (gargaarayaal) oon u hananayn naftooda Nacfi iyo dhib midna, dheh ma egyihiin Indhoole iyo wax Arke, mase egyihiin Mugdiyo iyo Nuur mise waxay u yeeleen Eebe Shuruko wax u Abuuray sida Abuurka Eebe oo waxaa isaga ekaaday Abuurkii, waxaad dhahdaa Eebaa wax kasta Abuuray waana kali awood badan.

قُلْ مَنْ رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ قُلِ اللَّهُ قُلْ أَفَتَأْخُذُونَ
دُونَهُ آلِيَاءَ لَا يَمْلِكُونَ لَكُمْ شَيْئًا وَتَعْتَابُونَ لَأَضْرَأَنَّ
هَلْ يَسْتَوِي الْأَعْمَىٰ وَالْبَصِيرُ أَمْ هَلْ تَسْتَوِي الظُّلُمَاتُ
وَالنُّورُ أَمْ جَعَلُوا لِلَّهِ شُرَكَاءَ خَلَقُوا كَلْفَهُمْ فَتَشَبَّهُ الْخَلْقُ
عَلَيْهِمْ قُلِ اللَّهُ خَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ وَهُوَ الْوَّاحِدُ الْقَهْدُ ﴿۱۶﴾

17. wuxuu ka soo dejiyey Samada Biyo waxaana la durduray waadiyo Awooddood wuxuuna xambaartaa daadku daadxoow sarraysa, waxay dabka ku huriyaanna Doonid isku qurxin, ama alaabo waxaa ah abur la mida, saasuuna Eebe ugu yeelan tusaale xaqa iyo Baadilka, Xumbaduse way tagi iyadoo

أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَسَالَتْ أَوْدِيَهُمْ بِعَدْرِهَا فَاخْتَلَفَ
الَّذِينَ نَزَّلْنَا آيَاتِنَا وَمِمَّا يُوقُونَ عَلَيْهِ فِي النَّارِ أَبْتِغَاءَ
حِلْيَةٍ أَوْ مَتَاعٍ زَيْدٌ مِثْلَهُ كَذَلِكَ بَصُرَ اللَّهُ أَهْلَ
وَالْبِطْلُ فَأَمَّا الزَّبَدُ فَيَذْهَبُ جُفَاءً وَأَمَّا مَا يَنْفَعُ
النَّاسَ فَيَمْكُثُ فِي الْأَرْضِ كَذَلِكَ بَصُرَ اللَّهُ

ingagan waxa dadka anficise wuxuu ku nagaan dhulka, saasuuna Eebe u yeelaa Tusaalayaasha.

آلَمَاتِلَ ١٧

Eebe mooyee Ilaah kale oo xaq lagu coabudo ma jiro, Cirka, Dhulka iyo Khalqiga dhammaanna Eebaa ahaysiiyey, mana mudna cid kale in wax lala wadaajjiyo, illeen waxba ma hantaane, mana sinna Mu'min iyo gaal, sidayna u sinnayn indhoole iyo wax arke, iyo Mugdi iyo Iftiin, wax abuura Eebe oo kalena ma jiro, Eebase wax kasta abuuray, waana kali awood badan, isagaana roobka keena Togogana durduriya iyagoo xambaarsan xumbo sarreysa, sida xumbada birta, saasuuna Eebe ugu yeelaa Tusaale Xaqa iyo Baadhilka, xumbaduse way tagtaa iyadoo ingagan waxa dadka anficise dhulkuu ku hadhaa, saasuuna Eebe wax u tusaaleeyaa, arrintaasuna waxay ku tusin in Eebe Ilaaha xaqa yahay, inayna sinnayn Mu'min iyo Gaal, Mugdi iyo Nuur, in Roobka Eebe keeno, in xumaantu baabi'in xaquna sugnaan, waana tusaale caddeyn sida kala bixi Maalinta Qiyaame iyo Aakharo. «Allaha sahlo». Ar-Racd (16-17).

18. kuwa Eebahood ajiibay (Maqlay) waxaa u sugnaaday wanaag (janno) kuwaan ajiibin (maqlinna) hadduu u sugnaado waxa dhulka ku sugan dhammaan oo wax la mida la jiro way isku furan lahaayeen kuwaasna waxaa u sugnaaday xisaab xun (daran) Hooygooduna waa Jahannamo iyadaana u xun gogol.

الَّذِينَ آمَنُوا وَلَمْ يَلْبِسُوا إِيمَانَهُم بِظُلْمٍ أُولَٰئِكَ لَهُمُ الْحَقُّ وَالَّذِينَ لَمْ يَسْتَجِيبُوا لِلَّهِ
لَوْلَا لَهُمْ مَتَاعِي الْأَرْضِ جَمِيعًا وَمِثْلَهُ مَعَهُ لَافْتَدَوْا
بِهِ أُولَٰئِكَ لَهُمْ سُوءُ الْحِسَابِ وَمَأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ وَهُمْ فِيهَا
الْمِهَادُ ١٨

19. cid og in waxa lagaaga soo dejiyey xagga Eebahaa uu xaq yahay ma la midbaa mid indho la', waxaa uun waantooma kuwa caqliga leh.

* أَفَمَنْ يَعْلَمُ مَنَّا أَنْزَلَ إِلَيْنَا مِنَ رَبِّكَ الْحَقُّ كَمْ هُوَ اعْتَمَىٰ
إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُولَٰئِكَ الْأَلْبَابِ ١٩

20. ee ah kuwa Oofiya ballanka Eebe oon burininna ballanka adag.

الَّذِينَ يُؤْفُونَ بِعَهْدِ اللَّهِ وَلَا يَنْقُضُونَ الْعَيْثَ ٢٠

21. ee ah kuwa xidhiidhiya waxa Eebe faray in la xidhiidhiyo kana cabsada Eebahood kana cabsada xisaab xun.

وَالَّذِينَ يَصِلُونَ مَا أَمَرَ اللَّهُ بِهِ أَنْ يُوصَلَ وَيَخْشَوْنَ
رَبَّهُمْ وَيَخَافُونَ سُوءَ الْحِسَابِ ٢١

22. ee ah kuwa u samray doonid wajiga Eebahood dartiis, oogayna Salaadda, kana bixiyey waxaan ku arzaaqnay qayb qarsoodi iyo muuqaalba, raacsiyana wanaagga xumaanta, kuwaas cidhib fiican yaa u sugnaatay.

وَالَّذِينَ صَبَرُوا ابْتِغَاءَ وَجْهِ رَبِّهِمْ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ
وَأَنْفَقُوا مِمَّا رَزَقْنَاهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً يَدْرُسُونَ بِالْحَسَنَةِ
الَّتِي آتَيْنَا أُولَٰئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ٢٢

23. waxaana gali jannada cadnin iyaga iyo cidda suuban oo Aabbayaalkooda, Haweenkooda iyo caruurtooda, Malaa'igtuna waxay uga soo gali irid kasta.

جَنَّاتٍ عَدْنٍ يَدْخُلُونَهَا وَمَنْ صَلَحَ مِنْ آبَائِهِمْ وَأَزْوَاجِهِمْ
وَدُرِّسَتِهِمْ وَالْمَلَائِكَةُ يَدْخُلُونَ عَلَيْهِمْ مِنْ كُلِّ بَابٍ ﴿١٣﴾

24. iyagoo ku dhihi Nabadgalyo korkiinna ha ahaato samirkiinna dartiis waxaa wanaag badan cidhibta daarta (Janno).

سَلَّمَ عَلَيْكُمْ بِمَا صَدَقْتُمْ فَيَغْمَعُ الْبَارِئِينَ ﴿١٤﴾

Wanaag fale wanaag iyo jannaa u sugnaaday illeen Eebuu maqlaye, kuwaan Eebe maqlinna waxa dhulka ku sugan hadday leeyihiin dhammaan iyo wax la mida way isku furan lahaayeen Qiyaamada waxaana u sugnaaday xisaab xun iyo Hooy cadaab, mana sinna cid og xaqnimada Quraanka iyo cid ka indho la'waanaduna waxay anfacdaa kuwa caqliga leh ee oofiya cahdiga iyo Ballanka Eebe, ee xidhiidhiya waxa Eebe faray in la xidhiidhiyo oo Qaraabo iyo Dadka dhibaataysan iyo Xaqa Eebe, xisaab xunna ka yaaba, ee samra oo u adkaaysta cibaadada dar Eebe, Oogana Salaadda waxna bixiya Qarsoodi iyo muuqba, waana kuwa cidhib fiican iyo Jannada cadnin u sugnaatay iyaga iyo Ehelkooda Wanaagsan, Malaa'igtuna meel walba way uga soo geli iyadoo salaami uguna bogaadin cidhibta fiican, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Kooxda jannada u hor gali waa fuqarada kuwii dar Eebe u Hijrooday, Ilaaliya xuduudda Islaamka oo xumaanta lagaga dhawrsado isagoo dantiisii Laabta ku haysta wax u gudina jirin. waxaa wariyey Imaam Axmed. Ar-Racd (18-24).

25. kuwa buriya Ballanka Eebe adkayntiisa ka dib gooyana wuxuu faray Eebe in la xidhiidhiyo oo fasaadiyana dhulka kuwaas waxaa u sugnaaday Lacnad iyo Guri xun.

وَالَّذِينَ يَنْقُضُونَ عَهْدَ اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مِيثَاقِهِ
وَيَقْطَعُونَ مَا أَمَرَ اللَّهُ بِهِ أَنْ يُوصَلَ وَيُفْسِدُونَ
فِي الْأَرْضِ أُولَئِكَ لَهُمُ اللَّعْنَةُ وَلَهُمْ سُوءُ الدَّارِ ﴿١٥﴾

26. Eebaana u fidiya rizqiga cidduu doono kuna cidhiidhiya (cidduu doono), waxayna ku farheen gaaladii Nolosha Adduunyo, mana aha nolosha adduunyo Aakharo agteeda waxaan maalmo lagu raaxaysto ahayn.

اللَّهُ يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَنْ يَشَاءُ وَيَقْدِرُ وَفَرِحُوا بِالْحَيَاةِ
الدُّنْيَا وَمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا فِي الْآخِرَةِ إِلَّا مَتَاعٌ ﴿١٦﴾

27. waxay dhihi kuwii gaaloobay maxaa loogu soo dejin waayey korkiina Aayado Eebihiisa xaggiisa, waxaad dhahdaa Eebe wuu dhumiya ciduu doono (oo xaqa diida) wuxuuna u hanuuniyaa xaggiisa ciddii u noqota.

وَيَقُولُ الَّذِينَ كَفَرُوا لَوْلَا نُزِّلَ عَلَيْهِ آيَةٌ مِنْ رَبِّهِ قُلْ
إِنَّ اللَّهَ يُضِلُّ مَنْ يَشَاءُ وَيَهْدِي إِلَيْهِ مَنْ أُنَابَ ﴿١٧﴾

28. ee ah kuwa rumeeyey Xaqa kuna xasishay Quluubtoodu xuska Eebe, xuska Eebayna ku xasishaa Quluubtu.

الَّذِينَ آمَنُوا وَتَطْمَئِنُّ قُلُوبُهُمْ بِذِكْرِ اللَّهِ أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ
تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ ﴿١٨﴾

29. ee ah kuwa rumeeyey xaqa falayna camal suuban waxaana u sugnaaday khayr iyo Nicmo iyo Noqosho wanaagsan.

الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ طُوبَىٰ لَهُمْ وَحَسُنَ
مَا أَجْرُهُمْ ﴿٢٩﴾

Aayadda hore kuwa ku xusan waa kuwa ka soo horjeeda Mu'miniinta ee Buriya ballanka gooyana wuxuu faray in la xidhiidhiyo Eebe, dhulkana fasaadiya oo xumaan iyo gaalnimu iyo dulmi ku maamula, kuwaas lacnad iyo guri xun baana u sugnaaday, Awooddana Eebaa iska leh oo cidduu doonana, Imtixaan ugu waasiciya, kuu doona wax kaafiya siiya ama ku cidhiidhiya, mana aha jeceyl iyo Nacayb midna, Gaalana waxay ku farxaan adduunyada, Nolosha Adduunyana markii loo eego Aakharo iyo waxa Eebe u darbay Mu'miniinta waa maalmo raaxo leh ee tegi, waxaana Xadiith ku sugnaaday: adduunyadu markii loo eego Aakharo waa far bad la geliyey, bal ha eego wuxuu ka soo celiyey. wariye «Muslim». Gaalana mucjiso doonid iyo madax adag waa caadadood, Ciddiise xaqa diida Eebaa sii dhumiyaa, tii hanuunka doontana wuu hanuuniyaa, ee qalbigeedu ku xasisho xuska Eebe, Xusidda Eebaana Quluubtu ku xasishaa, Kuwaa xaqa rumeeyey ee camal fiican fala waxay heli Janno iyo Noqosho fiican, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabaddgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Jannada waxaa ah geed uu socda kan saaran hooskeed Boqol sano oosan goynayn. Waxaa wariyey Bukhaari. Wakaas xaqa Eebe iyo Awooddiisa, iyo xaalka Adduun iyo kan aakhiro iyo wax qalbigu ku xasilo iyo Janno iyo wanaag iyo hanuun iyo baadi ciddii caqli lahna way kala dooran. Ar-Racd (25-29).

30. saasaan kuugu dirray Ummad ay tageen Ummado hortood inaad ku akhrido kaan kuu waxyoonaay iyaguna waxay ka gaaloobi Eebaha Raxmaana, waxaad dhahdaa isagaa rabbigay ah, ku Xaq lugu caabudo oon isaga ahayna Majiro isagaana tala saartay xagiisaana u noqon.

كَذَٰلِكَ أَرْسَلْنَاكَ فِي أُمَّةٍ قَد خَلَّتْ مِن قَبْلِهِمَا
أُمَّةٌ لَّيْسَتْ لَكَ عَلَيْهِمُ الذِّكْرِ أََوْحِيْنَا إِلَيْكَ وَهُمْ
يَكْفُرُونَ يَا زَعْمَنُ قُلْ هُوَ رَبِّي لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ عَلَيْهِ
تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ مَتَابٌ ﴿٣٠﴾

31. haddii Quraan dartiis buuro lala kaxayn, ama lala goyn dhulka ama lagula hadli Dadkii dhintay (Wuxuu noqon lahaa Quraankan) amarkase Eebaa dhammaantiis iska leh, miyeyanse ogayn kuwa rumeeyey xaqu hadduu Eebe doono inuu hanuunin lahaa Dadka dhammaan kamana tagaan kuwii gaaloobay (Xumaan) intay kaga dhacdo Musiibo waxay faleen Darteed ama degto meel ku dhaw guryahooda intuu ka yimaaddo Yaboo-hii Eebe, Ilaah Ma baajiyo ballanka.

وَلَوْ أَنَّ قَوْمًا سَأَلُوا رَبَّكَ بِهَذَا الْقُرْآنِ
أَوْ كَلِمَةٍ مِّنْهُ لَيَسَّرَنَّ لَكُمْ يَأْتِيَنَّ
الَّذِينَ ءَامَنُوا أَنَّ لَوْ سَأَلَنَّهُ لَهَدَى النَّاسَ جَمِيعًا
وَلَا يَسْأَلُ الَّذِينَ كَفَرُوا لِيُصِيبَهُمْ بِمَا صَنَعُوا قَارِعَةً
أَوْ تَخْلُفَهُمْ فِي آيَاتِنَا وَمَا نَدَّبُنَا إِلَى اللَّهِ
لَا يَخْلِفُ الْعِقَادَ ﴿٣١﴾

32. waxaa lagu Jees Jeestay Rasuullo kaa horreeyey markaasaan sugay kuwii gaaloobay, ka dibna waan Qabtay ee

وَلَقَدْ أَسْتَهْزَيْتُمْ بِرُسُلِنَا مِن قَبْلِكَ فَأَمَلَيْتُمُ الَّذِينَ
كَفَرُوا ثُمَّ أَخَذْتُهُمْ فَكَيْفَ كَانَ عِقَابِ ﴿٣٢﴾

siday noqotay ciqaabtaydii (Way dar-
rayd).

Eebe wuxuu sheegay Nabiga Inuu u diray ummad ay ka horreeyeen ummado Rasuullo loo diray, si aad ugu akhrido waxa lagu waxyooday, waxayna ka gaaloobi Eebaha Raxmaan, waxaad dhahdaa waa Eebahay, Ilaah xaq lugu caabudo majiro isaga mooyee, isagaanan talo saartay Xaggiisaana u noqon, u toobad keeni, Eebana isagoo amaani quraanka wuxuu sheegay in haddii Kutubihii hore laga heli Kitaab Buuraha meeshooda ka kaxeeya ama dhulka lala Gooyo, ama dadkii dhintay lagula hadlo waxaa ka mudnaan lahaa Quraankan, Amarka Eebaa dhammaantiis iska leh, miyeynase ogayn kuwii rumeeyey in hadduu Eebe doono hanuunin lahaa Dadka dhammaan. Gaalana kama tagaan xumaanta inta kaga dhacdo Musiibo, ama ay ku dhacdo meesha u dhaw Guryahooda intuu ka yimaado yaboohii Eebe oo ah guusha Islaamka, ama Qiyaamada, Eebana ma baajiyo ballanka. Waxaa lagu jees jeesay Rasuullo kaa horreeyey waxaana u sugay gaaladii markaasaan qabtay ee siday tahay ciqaabtaydii. Aayaduhuna waxay caddayn Rasuulnimada Nabiga, Kalinimada Eebe, Talasaarshadiisa, in isaga loo noqon, fadliga iyo Sharafta Quraanka, Madax adaygga Gaalada, in la ciqaabi Eebana oofin ballanka. Ar-Racd (30-32).

33. cid ku ilaalin naf kastaa waxay kasbatay (Eebe) ma la midbaa midaan saas ahayn, waxayna u yeeleen Eebe Shurako dheh magacaaba, mise waxaad Eebe uga warramaysaan waxaan joogin Dhulka, mise hadal muuqaala, saas ma aha ee waxaa loo qurxiyey kuwii gaaloobay dhagartooda waxaana laga leexiyey Jidka, cid Eebe dhumiyeyna ma laha wax hanuunin.

أَفَمَنْ هُوَ قَائِمٌ عَلَىٰ كُلِّ نَفْسٍ بِمَا كَسَبَتْ وَيَجْعَلُوا لِلَّهِ
شُرَكَاءَ قُلُوبًا سَمُّوهُمْ أَمْ تُنَبِّئُونَهُ بِمَا لَا يَخْفَىٰ فِي الْأَرْضِ
أَمْ يَظْهَرُونَ مِنَ الْقَوْلِ بَلْ رُبُّنَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَكْثَرُهُمْ
وَصُدُّوا عَنِ السَّبِيلِ وَمَنْ يَضِلِّ اللَّهُ فَمَا لَهُ مِنْ هَادٍ ﴿٣٣﴾

34. waxayna mudan cadaab nolosha adduun, cadaabka aakhiraana daran mana u sugna wax Eebe ka Ilaalin.

لَهُمْ عَذَابٌ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَعَذَابٌ آخِرٌ وَأَشَقُّ
وَمَا لَهُمْ مِنَ اللَّهِ مِنْ وَاقٍ ﴿٣٤﴾

35. tusaalaha (tilmaanta) jannada loo darbaw kuwa dhawrsada waa inay dhex socdaan Wabiyaalkii, Cunnadeeduna waa joogto iyo hooskeedu, taasina waa cidhibta kuwa dhawrsada cidhibta gaaladuna waa Naar.

﴿ مَثَلُ الْجَنَّةِ الَّتِي وَعَدَ الْمُتَّقُونَ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا
الْأَنْهَارُ كُلَّمَا دَاخِلٌ مِنْهَا مِنْ مَاءٍ غُلِّقَتْ عَلَيْهِ
الْأَيُّنُ فَكَانُوا عَلَيْهَا جَانِبًا ﴾ ﴿٣٥﴾

Eebaa wax walba illiyaha oo daalacan, wax la midana ma jiro, iyo wax ku dhaw midna, Shurakada ay u yeeleenna waa been ay magacaabeen oon joogin Dhulka iyo war muuqaalkiis, mase Eebay uga warrami Khaqiqiisa kuwaas wuxuu shaydaan u qurxiyey dhagartooda, jidka Xaqa ahna waa laga awday, wax toosinna ma helaan, waxayna mudan Cadaab adduun iyo mid ka daran oo Aakhiro, wax Eebe ka dhawrina ma jiro, Jannada loo darbaw Mu'miniinta dhawrsatana waa in Wabiyaal dhex socdaan Cunnadeeda iyo hooskeeduna Joogto yahay, waana cidhibta kuwa dhawrsada, sida Naartu u tahay cidhibta Gaalada. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wax badan yuu fasiray Aayadaha Jannada ka warrami oo tilmaamay inay Nicmo ku dhantahay, kumaanna ka fogtahay, lagana dhimanayn, dhib iyo rafaadna lahayn, ciddii caqli lehna waa inay darbatu, una guuro, una galab caraabu, hana kallaho cid guurtayna way gaadhaa Maqsadkeeda, haddiise lagu khaldamo dhalanteed iyo

bildhaanta Adduun waa uun khasaare iyo halaag. «Eebe ha na toosiyo». Ar-Racd (33-35).

36. kuwaan siinnay Kitaabka waxay ku farxaan waxa lagugu soo dejiyey, xisbiyada waxaa ka mida kuwo diigi Qaarkiis, waxaad dhahdaa waxaa uun lay faray inaan caabudo Eebe una shariig yeelin, xaggiisaan u yeedhi xaggiisaana u noqon.

وَالَّذِينَ اتَّخَذُوا الْكُتُبَ يَمْسُحُونَ بِمَا أُنزِلَ إِلَيْكَ
وَمِنَ الْأَخْزَابِ مَنْ يُنْكِرُ بَعْضَهُ، قُلْ إِنَّمَا أُمِرْتُ
أَنْ أَعْبُدَ اللَّهَ وَلَا أُشْرِكَ بِهِ إِلَيْهِ أَدْعُوا وَإِلَيْهِ
مَقَابِلُ ﴿٣٦﴾

37. saasaana kuugu soo dejinnay xukun Carabi ah, haddaad raacdo hawadoodana intuu cilmi ku soo gaadhay ka dib, kama helaysid xagga Eebe gargaare iyo dhawre.

وَكَذَلِكَ أَنْزَلْنَاهُ حُكْمًا عَرَبِيًّا وَلَئِنْ اتَّبَعْتَ أَهْوَاءَهُمْ
بَعْدَ مَا جَاءَكَ مِنَ الْعِلْمِ مَا لَكَ مِنَ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ
وَلَا وَاقٍ ﴿٣٧﴾

38. waxaan dirray hortaa rasuullo waxaana u yeellay Haween iyo caruur, Rasuulna Mucjiso lama imaan karo idimka Eebe La'aantiis, muddo kastana way Qorantahay.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلًا مِنْ قَبْلِكَ وَجَعَلْنَا لَهُمْ أَزْوَاجًا
وَذُرِّيَّةً وَمَا كَانَ لِرَسُولٍ أَنْ يَأْتِيَ بِعَاقِبَةٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ
لِكُلِّ أَجَلٍ كِتَابٌ ﴿٣٨﴾

39. Eebana wuu tiraa wuxuu doono wuuna sugaa, Agtiisana waxaa ah Looxul Maxfuudka.

يَسْمَعُوا اللَّهَ مَا بَشَرَةٌ عَلَيْهِمْ وَعِنْدَهُ أُنزُكُ الْكِتَابِ ﴿٣٩﴾

Kuwii Ehelu Kitaabka ahaa Qaarkooda rumeeyey Nabiga iyo Xaquu la yimid way ku farxayeen, inkastoo koox ka mida ay diidi xaqa Qaarkiis, Nabigana waxaa la faray inuu Eebihis uun Caabudo xaggiisana ugu yeedho Dadka illeen xaggiisa loo noqone, saasaana loogu soo dejiyey Quraan Carabi ah, ciddii raacda hawo dad oo xun iyagoo u cilmi leh kama helayo xagga Eebe gargaare iyo ilaaliye midna, Inuu Eebe diro Rasuulna waa Jid Eebe oo horreeyey waxayna yeesheen Xaas iyo caruur, illeen waa Bani Aadame, Rasuul Mucjiso la imaan karana ma jiro idimka Eebe la'aantiis, wax kastana waqti go'an yuu leeyahay, wuxuu rabana Eebe wuu tiraa, wuxuu doonana wuu sugaa, Agtiisana waxaa ah Looxul maxfuudka.

Taasina waxay ku tusin in ciddii Cilmi iyo Caqli leh ay rumayn Nabiga iyo Quraanka, iyo in Eebe kaliya la caabudo, looguna yeedho dadka, ciddii xaqa ka leexata ayan gargaare heley, in Rasuulladu dad yihiin oo wax cuni waxna guursan waxna dhalaan, in Mucjisadu xagga Eebe ka timaaddo, in wax walba muddo leeyahay, in Eebe wuxuu doono tiro kuu doonana sugo. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Ruuxa waxaa Rizqiga looga Hoojiyaa Dambi dartiis, Ducaduna Qaddarkay wax ka tartaa, Cimrigana waxaa siyaadiya samo fal. Waxaa wariyey Axmed, Nasaai iyo kuwo kale. Ar-Racd (36-39).

40. haddaan ku tusinno qaar waxaan u yaboodhi (oo dulli ah waa saas) had-daanse ku Qofsanno waxaa uun kor-kaaga ah Gaadhsiin Anagana waxaa na saaran inaan xisaabinno.

وَإِنْ مَا رَيْتَكَ بَعْضَ الَّذِي نَعُدُّهُمْ أَوْ تَتَوَقَّعَتْ
فَإِنَّمَا عَلَيْكَ الْبَلْغُ وَعَلَيْنَا الْحِسَابُ ﴿٤٠﴾

41. miyeyna arkayn inaannu uga imaan dhulka darfaha anagoo nusqaamin furid (ama Abaar) Eebana wuu xukumi, wax burinna ma jiro xukunkiisa, waana midkay deg deg tahay xisaabtiisu.

أُولَئِكَ سَوَاءٌ أَلَمَّا أَتَى الْأَرْضَ نَقُصُّهَا مِنْ أَطْرَافِهَا
وَاللَّهُ يَحْكُمُ لَا مُعَقَّبَ لِحُكْمِهِ وَهُوَ سَرِيعٌ
الْحِسَابِ ﴿٤١﴾

42. waxaa wax dhagray kuwii ka horreeyey Eebaase abaal maris (Dhagar) iska leh dhammaan, wuxuuna ogyahay waxay kasban naf kasto, waxayna ogaan Gaaladu cidday u ahaato cidhib fiican.

وَقَدْ مَكَرَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَلِلَّهِ الْمَكْرُ جَمِيعًا يَعْلَمُ
مَا تَكْتُمُ كُلُّ نَفْسٍ لِنَفْسٍ وَسِعَ عِلْمُ الْكُفْرِ لِمَنْ
عُقِبَ الدَّارِ ﴿٤٢﴾

43. waxayna dhihi kuwii Gaaloobay ma tihid Rasuul, waxaad dhahdaa waxaa marag ugu filan dhexdeenna Eebe iyo cidda agteed ogaanshaha Kitaabku yahay.

وَقُولِ الَّذِينَ كَفَرُوا أَسْتَمْرَسَلًا قُلْ كَفَى بِاللَّهِ
شَهِيدًا بَيْنِي وَبَيْنَكُمْ وَمَنْ عِنْدَهُ عِلْمُ الْكِتَابِ ﴿٤٣﴾

(Nabiga Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) dhib ma saarra hadduu Eebe Cigaabo Gaalada intuu Nabigu Noolyahayna waa wanaag, hadduu ka hor Oofsadana waxaa uun Nabiga Saaran Gaadhsiin, Eebana Xisaabtooda, Wuuna u gargaaray Eebe Rasuulkiisa, Gaaladiina jabiyey isagoo Nool, waxaana u muuqatay in Dhulka Darfaha laga soo Nusqaaminayey oo Islaamku ka adkaanayey Gaalnimada, Xukunkana Eebaa iska leh, wax xukunkiisa ka daba hadli karana ma jiro, xisaabtiisuna way deg degtaa, dhagarna waa shaqada Gaalada ama ha horreeyeen ama ha dambeeyeen, Eebaase dhammaan abaal maris iska leh oo ka jaasiin, Gaalana mar umbay ogaan cidda cidhibta fiican u hadho, waxayba ku af adeygeen inay Nabiga Beeniyaan kuna dhahaan ma tihid Rasuul, maxaase looga baahanyahay maragooda, waxaa marag ugu filan Eebihis iyo ciddii Cilmi leh oo rumeysan Nabiga oo Ehelu Kitaabkii ah.

Suuradduna waxay ku dhamaatay Dhagarta gaalada xumideeda, in xaqu sarreyn, in cidhib fiican Muslimiintu heli, in Rasuullada Eebe soo diray maragna ugu filanyahay. Ar-Racd (40-43).



Suurat Ibraahiim

سُورَةُ إِبْرَاهِيمَ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

1. xarfaha hore oo kale waa la soo sheegay macnahooda, kanna waa Kitaab aannu kugu soo dejinnay inaad kaga bixisid dadka mugdiyada xagga Nuur idamka Eebhood iyo jidka Eebaha adkaada ee la Mahadiyoo.

2. Ilaaha iska leh waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, halaagna waxaa mudan Gaalada cadaab daran xaggiis.

3. oo ah kuwa ka jecel nolosha adduun Aakhiro oo ka leexiya (Dadka) Jidka Eebe lana dooni Qallooc, kuwaasuna waxay ku suganyihiin Baadi fog.

4. Rasuul kuma dirro waxaan Afka Qoomkiisa ahayn si uu ugu caddeeyo, wuuna baadiyeeyaa Eebe cidduu doono inta xaqa loo caddeeyey ka dib, wuuna hanuunin cidduu doono, waana adkaade falsan.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الرَّحْمٰنُ الَّذِي اَنْزَلْنٰهُ اِلَيْكَ لِتُخْرِجَ النَّاسَ مِنَ الظُّلُمٰتِ اِلَى النُّوْرِ بِاِذْنِ رَبِّهِمْ اِلَى صِرَاطٍ الْعَزِيزِ الْحَمِيدِ ۝١

اللّٰهُ الَّذِي لَهُ مَا فِى السَّمٰوٰتِ وَمَا فِى الْاَرْضِ ۗ وَوَيْلٌ لِّلْكَافِرِيْنَ مِنْ عَذَابٍ شَدِيْدٍ ۝٢

الَّذِيْنَ يَسْتَحِبُّونَ الْحَيٰوةَ الدُّنْيَا عَلَى الْاٰخِرَةِ وَيَصُدُّوْنَ عَنْ سَبِيْلِ اللّٰهِ وَيَسْعَوْنَ فِيْهَا عِوَجًا ۗ اُوْتِيَكَ فِيْ ضَلٰلٍ بَعِيْدٍ ۝٣

وَمَا اَرْسَلْنَا مِنْ رَّسُوْلٍ اِلَّا بِلِسٰنٍ قَوْمِهٖ يُبَيِّنُ لِهٖمْ فَيُضِلُّ اللّٰهُ مَنْ يَّشَاءُ وَيَهْدِيْ مَنْ يَّشَاءُ ۗ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيْمُ ۝٤

Quraanka Eebaa ku soo dejiyey Nabiga Muxameda (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu dadka mugdiga iyo jahiliga kaga saaro oo Nuur iyo jidka toosan ee Ilaahay u saaro, illeen Eebaa Awood lehe, lana mahdiyaa, lehan Cirka iyo Dhulka waxa ku sugane, halaag iyo ciqqabna waxaa mudan gaalada Adduun ka doortay Aakhiro oo Jidka Eebe Dadka ka leexiya doonina Qalloociisa iyo xumaantiisa, kuwaasuna waa kuwa baadi fog ku sugan, xigmada Ilaahayna waxay keentay in Rasuul kasta lagu bixiyo Afka Qoomkiisa si marka hore iyaga loo gaadhsiyo markaas u faafto Diintu, mana keenin xigmada Eebe in Afkasta lagu diro maxaa yeelay afoku way badanyihiin, Saasaana Nabigeenii loogu Bixiyey Luuqada Carabiga oo cidkastoo Muslima iyo Caalamkaba laga rabo inuu barto. Rasuulkana waxaa saaran u caddeyn xaqa, Dadkana waxaa saaran rumeyn, Eebana wuu xisaabin cid kasta waxay beeratay Khayr iyo Shar. Ibraahiim (1-4).

5. waxaan la dirray (Nabi) Muuse Aayaadkannaga Kagana bixi Qoomkaaga Mugdiyada xagga Nuurka, kuna

وَلَقَدْ اَرْسَلْنَا مُوسٰٓى بِآيٰتِنَا اَنْ اَخْرِجَ قَوْمَكَ مِنَ الظُّلُمٰتِ اِلَى النُّوْرِ وَذَكَرْتَهُمْ بِآيٰتِنَا

waani «xusuusi» Nicmooyinkii Ilaahay arrintaasna Aayaadbaa (Calaamooyin) ugu sugan samir badane, shugri badan dhammaantiis.

اللَّهُ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿٥﴾

6. iyo markuu Nabi Muuse ku yidhi Qoomkiisa xusuusta Nicmada Eebe korkiinna markuu idinka koriyey Colkii Fircoon iyagoo idin dhadhansiin cadaab (Daran) Xun oo gawrici Wilashiinna oo dayn Gabdhihiinna (Dullaysi) arrintaasna waxaa ku sugnayd Balaayo (Imtixaam) Eebihiiin oo wayn.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ أَدْعُوا رَبِّي عَزَمَ اللَّهُ عَلَيْكُمْ إِذْ أَنْجَاكُمْ مِنْ آلِ فِرْعَوْنَ يَسُومُونَ كُسُوفًا أَعْدَابًا وَيُذَيِّبُونَ أَبْنَاءَكُمْ وَيَسْتَحْيُونَ نِسَاءَكُمْ وَفِي ذَلِكَ لَكُمْ بَلَاءٌ مِّنْ رَبِّكُمْ عَظِيمٌ ﴿٦﴾

7. iyo markuu Eebehiin ogaysiiyey haddaad shukridaan waan idiin kordhin, haddaad gaalowdaanna cadaabkaygo waa daranyahay.

وَإِذْ تَأَذَّنَ رَبُّكُمْ لَئِن شَكَرْتُمْ لَأَزِيدَنَّكُمْ وَلَئِن كَفَرْتُمْ إِنَّ عَذَابِي لَشَدِيدٌ ﴿٧﴾

8. wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse haddaad Gaalowdaan idinka iyo waxa ku sugan Dhulka dhammaan Eebe waa Hodan mahadsan.

وَقَالَ مُوسَىٰ إِن تَصَفُّوْا أَنَا مِمَّنْ فِي الْأَرْضِ جَمِيعًا فَأَنَا اللَّهُ الْعَزِيزُ الْحَمِيدُ ﴿٨﴾

Eebe wuxuu la diray Nabi Muuse Sagaal Mucjiso si uu Qoomkiisa mugdiga uga saaro Nuurkana u tusiyo, kuna wacdiyo isagoo xusuusin Nicmooyinkii Eebe, waana arrin calaamo u ah ciddii samir iyo shugri badan. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalye Eebe korkiisa ha yeele) wuxuu yidhi: Amarka Mu'minku waa la yaab, wax kastoo Eebe u keeno waa u khayr, dhibhadduu ku dhaco wuu ku samraa Khayrbayna u noqotaa, haddii wanaag soo gaadhana wuu ku shugriyaa Khayrna way u noqotaa. «Waa xadiith saxiix». Nabi Muusana wuxuu xusuusiyey Qoomkiisii sida Eebe ugu Nicmeeyey uguna koriyey Fircoonkii dullaystay ee Wiilasha laynaayey Gabdhahana dullaysanayey, waxayna ahayd Imtixaam wayn, Eebana wuxuu dadka ogaysiiyey in Ciddii ku shugridana uu u kordhin Nicmada, tii ka gaalowdana cadaabka Eebe daranyahay, dhammaan hadday dadku gaaloobaana Eebe waa Hodan Mahadsan, umana baahna taakulayn iyo gacansiin, waxaase kaalmo u baahan miskiinkaa dadka ah ee haddana markuu ladanyahay wax isbidi. Ibraahiim (5-8).

9. miyuuna idin soo gaadhin warkii kuwii idinka horreeyey (oo ah) Qoomkii Nabi Nuux, Caad, Thamuud, iyo kuwii ka dambeeyey, ma oga (Tiradooda) Eebe mooyee, waxayna ula yimaadeen Rasuuladoodii xujooyin waxayna ku celiyeen Gacmahooda Afkooda (Way beeniyeen) waxayna dhaheen anagu waan ka gaalownay waxa laydinku soo diray annaguna shakibaan kaga sugan-

الرَّبِّ إِن كُرِهْتُمْ بِتُوبَةِ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ قَوْمٌ نُوحٍ وَعَادٍ وَثَمُودَ وَالَّذِينَ مِنْ بَعْدِهِمْ لَا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا اللَّهُ جَاءَتْهُمْ رُسُلُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَرَدُّوا أَعْيُنَهُمْ وَقَالُوا إِنَّا كَفَرْنَا بَمَا أُرْسِلْتُمْ بِهِ وَإِنَّا لَفِي شَكٍّ مِّمَّا تَدْعُونَنَا إِلَيْهِ مُرِيبٌ ﴿٩﴾

nahay waxaad noogu yeedhaysaan xag-giisa oo daran.

10. waxay dheheen Rasuuladoodii ma Eebaa shaki ku jiraa ee abuuray Samooyinka iyo Dhulka idiinkuna yeedhi inuu idinka dhaafo dambiyadiinna dibna idiin dhiga tan iyo muddo magacaaban, waxayna dheheen idinku ma tihiin waxaan bashar (Dad) nala mida ahayn, waxaadna doonaysaan inaad naga leexisaan waxay caabudi jireen Aab-bayaalkanno noo keena xujo cad.

﴿ قَالَتْ رُسُلُهُمْ أَفِى اللَّهِ شَكٌّ فَاطِرِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ يَدْعُوكُمْ لِيُقَفِّرَ كُمْ مِّنْ ذُنُوبِكُمْ وَيُخْرِجَكُم إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى قَالُوا إِنَّ أُنثَىٰ لِلْأَبَشَرِ مِثْلَنَا نُرِيدُونَ أَن يُصَدِّقُوا عَمَّا كَانَ يُعْبَدُ ءَابَاؤُنَا فَآتُونَا بِسُلْطٰنٍ مُّبِينٍ ﴿١٠﴾

11. Rasuulladii waxay dheheen annagu ma nihin waxaan dad idin la mida ahayn, Eebaase ku mannaysta (khayr) cidduu doono oo addoomadiisa ka mida, xujana idiinma keeni karro idinka Eebe mooyee, Eebe uunna ha tala saarteen Mu'miniintu.

﴿ قَالَتْ لَهُمْ رُسُلُهُمْ إِن نَّحْنُ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ وَلٰكِنَّ اللَّهَ يَمُنُّ عَلَىٰ مَن يَشَاءُ مِّنْ عِبَادِهِ ۖ وَمَا كَانَ لَنَا أَن نَّأْتِيَكُمْ بِسُلْطٰنٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ وَعَلَىٰ اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

12. maxaanaan u talo saaranayn Eebe isagoo nagu hanuuniyey Jidkannaga, waana ku samraynaa waxaad nagu dhibaysaan Eebe uun ha talo saarteen kuwa talosaaran (Cid).

﴿ وَمَا لَنَا أَلَّا نَتَوَكَّلَ عَلَى اللَّهِ وَقَدَّهَدْنَا سُبُلَنَا وَلَنَصْبِرْ عَلَىٰ مَا أَدْبَتْنَا عَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴿١٢﴾

Wax badan yuu Eebe ka warramay ummadihii hore iyo waxa ku dhacay si loogu waano qaato, wayna badnaayeen, Nabiyadii iyo Xaqiina waydiideen, iyagoo shakiyey xaqa, Rasuuladuse waxay u sheegeen inaan Eebe iyo xaqu shaki lahayn, see loo shakin Eebaha Cirka iyo Dhulka iyo wax kasta oo khalqi ah Abuuray, runtii waxaa shakin Eebe iyo Abuurkiisa gaalada liita ee jecel inay xumaanta dabaashaan si aan waxna u celin, Eebe dadka wuxuu ugu yeedhi dambi dhaaf, wuxuuna u yeelay waqti magacaaban, mana haboona in gaaladu xujaayaan in Nabiyadu dad la mida yihiin kana leexin waxay Aabbayaalkood caabudi jireen, Rasuuladuse waa dad Eebaase ku mannaystay waxyi iyo suubanaan, waxay la imaan karaanna ma jiro idin Eebe la'aan tiis, Eebaana cid la talo saarto ah, Mu'miniinta iyo Rasuuladuna isagay talo saartaan illeen isagaa hanuuniyey jidka toosanna ku tusiyey, waana in lgau samro oo loo adkaysto dhibka xaqa dartiis kugu gaadhi adoo isku dayi inaad si fiican isaga reebtid, Eebayna Mu'miniintu talo saartaan. Wakaas xaqii iyo wanaagii, maxayse hayaan gaalada xaqa diidaysa ee Beenaalayaasha ah waxba. Ibraahiim (9-12).

13. waxay ku dheheen kuwii gaaloobay Rasuuladoodii waxaynu idinka bixin dhulkannaga ama waxaad ku soo no-

﴿ وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِرُسُلِهِمْ لَنُخْرِجَنَّكُمْ مِّنْ أَرْضِنَا أَوْ لَتَعُوذُنَّ فِي مِلَّتِنَا فَأَوْحَىٰ إِلَيْهِمْ

qonaysaan (soo galaysaan) diintanna-
da, wuxuuna u waxyooday Eebahood
inuu halaago daalimiinta.

رَبُّهُمْ لَمْ يَكُنِ الظَّالِمِينَ ﴿١٣﴾

14. dajinna idinka dhulka kuwaas ka
dib, arrintaasna waxaa heli ciddii ka
cabsata la kulankayga oo ka cabsata
gooddigayga.

وَأَلْسَكَتَكُمْ الْأَرْضَ مِنْ بَعْدِهِمْ ذَلِكَ لِمَنْ
خَافَ مَقَامِي وَخَافَ وَعِيدِ ﴿١٤﴾

15. wayna gargaar dalbeen waxaana
khasaaray kibir badne madax adag
dhammaantiis (xaq diid).

وَأَسْتَفْتَحُوا وَخَابَ كُلُّ جَبَّارٍ عَنِيدٍ ﴿١٥﴾

16. waxaana ka horraysa jahannamo
waxaana laga waraabin Biyo carow ah
(Dhaacaanka Ehelu Naarka).

مِنْ وَرَائِهِ جَهَنَّمَ وَنُفِثَ مِنْ مَاءٍ صَدِيدٍ ﴿١٦﴾

17. wuuna ku margan mana ka degayo
wuuna uga imaan Mawdku (Geeridu)
meel kasta, mana dhimanayo, gadaas-
hiisna waxaa ah cadaab adag.

يَتَجَرَّعُهُ وَلَا يَكَادُ يُسِغُهُ وَيَأْتِيهِ الْمَوْتُ مِنْ
كُلِّ مَكَانٍ وَمَا هُوَ بِمَيِّتٍ وَمِنْ وَرَائِهِ
عَذَابٌ غَلِيظٌ ﴿١٧﴾

18. kuwa ka gaaloobay Eebahood
wuxuu la midyahay camalkoodu darn-
bas ku darraatay «ku dhacday» dabayli
maalin dabayl dhabasho daran, kama
karaan (helaan) waxay Kasbadeen wax-
ba, kaasina waa baadida fog uun.

مَثَلُ الَّذِينَ كَفَرُوا بِرَبِّهِمْ أَعْمَالُهُمْ كَرَمَادٍ
أَسْتَدَّتْ بِهِ الرِّيحُ فِي يَوْمٍ عَاصِفٍ لَا يَقْدِرُونَ مِمَّا
كَسَبُوا عَلَى شَيْءٍ ذَلِكَ هُوَ الضَّلَالُ
الْبَعِيدُ ﴿١٨﴾

Siday caadada gaaladu tahay had iyo jeer waxay ku haddidijireen Rasuulladii inay dhulkooda ka eryi ama ay soo geli Diintooda, waxaad moodaa inay dhulka iyaga kaliya leeyihiin dhabtuna waa in dhulka Eebe leeyahay ugana raalli yahay inay ku noolaato ciddii cadaalad iyo Islaanimo ku fulin oyan gaaladu lahayn say sheegi, daalin waa la halaagi waxaana u hadhi dhulka Ciddii Eebe yaabta, Rasuulladii iyo gaaladuba way gargaar warsadeen, waxaase khasaari ciddii kibir badan oo xaqa iskala wayn Galina cadaab daran oon geeri iyo nolol midna ahayn, gaalada camalkeeduna waa sida dambas dabaylu qaadday oo waxba kama helaan, waxayna ku suganyihiin Baadi fog. Waxaa Abii umaamo laga wariyey in Nabigu Yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeele) in Biyo Naareed loo soo dhawayn gaalka oo uu nici wajiga iyo madaxana ka gubi markuu cabbana Xiidmuhu soo daadan. Waxaa wariyay Imaam Axmed. Eebe ha naga koriyo Naarta. Camalbase loo baahanyahay. Ibraahiim (13-18).

19. miyeydaan arkayn in Eebe u abuu-
ray Samooyinka iyo dhulka xaq, had-
duu doonana idin tagsiin karo lana
imaan karo khalqi cusub.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ
إِنْ يَشَاءُ يُدْهِبْكُمْ وَيَأْتِ بِخَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٩﴾

20. arrintaasina Eebe kuma adka.

وَمَا ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ بِعَزِيزٍ ﴿٢٠﴾

21. waxayna dadku u soo bixi Eebe markaasay ku dhihi kuwii «raaciyadda» ahaa kuwii madaxda ahaa anagu idinkaana idin raacaynay ee wax ma nooga taraysaan cadaabka Eebe, waxayna dhahaan hadduu Eebe na hanuuniyo waan idin hanuunin lahayn, waa isugu mid korkeenna haddaan argagaxno ama samirno (adkaysanno) ma helayno fakasho.

وَيَرْزُقُ اللَّهُ جَمِيعًا قَلِيلًا لِّذُنُوبِهِمْ
أَسْتَكْبَرُوا إِنَّا كُنَّا لَكُمُ تَبِعًا فَهَلْ أُنْتُمْ مُعْتَدُونَ
عَنَّا مِنْ عَذَابِ اللَّهِ مِنْ شَيْءٍ قَالُوا لَوْلَا نُهَيْدُنَا اللَّهُ
لَهَدَيْتُمْ كُمْ سِوَاهُ عَلَيْنَا أَجْرَعْنَا أَمْ صَبْرْنَا
مَا لَنَا مِنْ مَّجِيصٍ ﴿١١﴾

22. wuxuuna dhahaa shaydaankii marka amarka la xukumto, Eebe wuxuu idiin yaboohay yabooh xaq ah anna waan idiin yaboohay waana idinku beeniyeey, wax xujo ahna idinkuma lahayn oon ahayn inaan idiin yeedhay ood i maqasheen ee hay dagaalina ee dagaala naftiinna anuguna idiinma gargaari karo idinna iima gargaari kartaan, anugu waan diiday waxaa ila wadaajiseen horay daalimiinatuna waxay mudan cadaab daran.

وَقَالَ الشَّيْطَانُ لَمَّا قُضِيَ الْأَمْرُ إِنَّ اللَّهَ وَعَدَكُمْ
وَعَدَ الْحَقُّ وَوَعَدْتُمْكُمْ فَأَخْلَفْتُمْكُمْ
وَمَا كَانَ لِي عَلَيْكُمْ مِنْ سُلْطَانٍ إِلَّا أَنْ
دَعَوْتُكُمْ فَاسْتَجَبْتُمْ لِي فَلَا تَلُمُونِي وَلَوْلَا
أَنْفُسُكُمْ مَا آتَاكُمْ بِمُصْرِحِكُمْ وَمَا أَنْتُمْ بِمُصْرِحِي
إِنِّي كَفَرْتُ بِمَا أَشْرَكْتُمُونِ مِنْ قَبْلُ إِنَّ
الظَّالِمِينَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٢﴾

23. waxaana la gelin kuwii rumeeyey xaqa oo camal fiican falay Jannoyin ay socoto dhexdeeda wabiyadii iyagoo ku dhex waari idanka Eebe dartiis soo dhawayskooduna dhexdeeda waa salaana.

وَأَدْخَلَ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ جَنَّاتٍ
تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِمْ
حَتَّىٰ تَهْمَرُ فِيهَا سَلْسَلَةٌ ﴿١٣﴾

Dadkoo dhan Eebeb hor imaan Qiyaamada, waxaana is dagaali oo murmi Madaxdii xumayd iyo raaciyaddoodii oo ay racaciyaddu dhihi idinkaa na dhumiyey ee wax ma noo taraysaan, iyana ugu jawaabi inayan waxba u tarayn, hadday argagaxaan iyo hadday adkaystaanna isku mid tahay wax u gargaarina ayan helayn, waxaana la xidhiidhiyey iyaga iyo shaydaan oo isna marka dadka la kala xukumo u sheegi kuwuu dhumiyey in Eebe dhabta u sheegay isna been u sheegay wax xooga ama xujo ahna uusan u haysan saasna warkiisii ku maqleen, ee haysdagaaleen iyagu ee yeyna dagaalin isaga waxna isuma tari karaan, wuuna kaga baxay warkoodii, gaalna cadaab daran baa u sugnaaday, mu'iniintana waxaa la gelin jannooyin khayr ku dhanyahay ay ku waari dhexdeedana ay salaana iyo Nabadgalyo kala kulmi. saasayna u muuqataa siday isu dagaali isuna canaana Madaxdii dhumisay dadkeeda iyo dadkeey dhumiyeen, iyo siduu shaydaan khudub ugu akhrin kuwuu dhumiyey. Shacbi wuxuu yidhi: Wuxuu ka khudbayn Qiyaamada dadka hortooda. saas darteed waa inaan cidna lagu raacin xumaan laga digtoonaado Shaydaanka Jinniga iyo kan insigaba, Eebana aan lagaa dhex marin si aad u liibaanto. Ibraahiim (19-23).

24. ma ogtahay sida Eebe ugu yeelay Tusaale kalimada (Erayga) Fiican sida Geed wanaagsan oo xididadeedii dhulka ku suganyihiin laamaheediina samada (kor jiraan).

الرُّتْرَ كَيْفَ صَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا كَلِمَةً طَيِّبَةً
كَشَجَرَةٍ طَيِّبَةٍ أَصْلُهَا ثَابِتٌ وَفَرْعُهَا
فِي السَّمَاءِ ﴿١٤﴾

25. oo siisa (Bixisa) Cunnadeeda Waqti kasta idanka Eebaheed dartiis, wuuna u yeelaa Eebe tusaalayaal Dadka inay waantoomaan.

تُؤْتِي أَكْثَرَهَا كُلِّ حِينٍ بِإِذْنِ رَبِّهَا وَيَصْرُبُ اللَّهُ
الْأَمْثَالَ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿١٥﴾

26. Kalimada (Erayga) xunna (Gaalnimada iyo xumaanta) waxay la mid tahay geed xun lagana rujeyey dhulka korkiisa oon sugnaan lahayn.

وَمَثَلُ كَلِمَةٍ خَبِيثَةٍ كَشَجَرَةٍ خَبِيثَةٍ
اجْتُثَّتْ مِنْ فَوْقِ الْأَرْضِ مَا لَهَا مِنْ قَرَارٍ ﴿١٦﴾

27. wuxuu ku sugaa Eebe kuwa ru-meeyey xaqa Erayga sugan (ashahaadada iyo xaqa) Nolosha aduun iyo Aakhiraba wuxuuna dhumiyaa daalimiinta, wuxuuna falaa Eebe wuxuu doono.

بُيِّتَ اللَّهُ الَّذِينَ ءَامَنُوا بِالْقَوْلِ الثَّابِتِ فِي الْحَيَاةِ
الدُّنْيَا وَفِي الْآخِرَةِ وَيُصَلِّ اللَّهُ الظَّالِمِينَ
وَيَعْمَلُ اللَّهُ مَا يَشَاءُ ﴿١٧﴾

28. ma ogtahay kuwa ku badelay Nicmaddii Eebe Gaalnimo, Dejiiyeyna qoomkoodii guri halaag.

* الرُّتْرَ إِلَى الَّذِينَ بَدَلُوا نِعْمَتَ اللَّهِ كُفْرًا
وَأَحْلَوْا قَوْمَهُمْ دَانَ الْبُورِ ﴿١٨﴾

29. Jahannamayna gali meel lagu sugnaadana iyadaa u xun (Jahannamo).

جَهَنَّمَ يَصَلُّونَهَا وَيُسُّ الْقَرَارِ ﴿١٩﴾

30. waxayna u yeeleen Eebe shariig inay ka dhumiyaan jidkiisa, waxaad dhahdaa raaxaysta ahaanshihiinnu waa Naare.

وَجَعَلُوا لِلَّهِ أَنْدَادًا لِيُضِلُّوا عَنْ سَبِيلِهِ قُلْ
تَمَتَّعُوا فَإِن مَّصِيرَكُمْ إِلَى النَّارِ ﴿٢٠﴾

Hadal fiican iyo xaqu wuxuu la mid yahay geed fiican oo midho badan waqti kastana cunno laga helo, tan xunna waxay la mid tahay geed xun oon sugnayn waxna laga helayn, hadalka fiicanna waxaa u horreeya ashahaadada waxaana soo raaca hadal kasta oo khayra, kan xuuna waa gaalnimo iyo dambi iyo dhib muslim, Eebana wuxuu Mu'miniinta ku sugaa Adduunyo aakhiraba hadalka sugan ee xaqa ah, waxaana Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka Sugnaaday Xadiithyo badan oo ka warrami su'aasha qabriga iyo sida Mu'minka Eebe u waafajin xaqa una dhihi Eebahay waa laahay, Diintaydu waa Islaam, Nabigaygu waa Muxammad, markaas loo Nicmayn, Daalimiintase wuu dhumiyaa oo gafsiyaa xaqa illeen iyagaa ka jeedsadaye, Eebana wuxuu doono yuu falaa, wax ka xun ma jiro kuwa ku badasha Nicmada xaqa iyo Wanaagga gaalnimo iyo xaq diiddo, Dadkoodiina dejiya

una horseeda guri halaag iyo Jab, iyo Jahannamo iyo meel daran, una yeela Eebe shurako iyo wax lala caabudo xaq darrana arrinkiisa lagu raaco, Ibnu cabbas wuxuu yidhi:

Gaaladoo dhan yaa loola jeedaa oo Eebe wuxuu ku soo diray Nabiga Muxamad Naxariis iyo Nicmo, ciddii ogolaatana oo ku mahdisa Eebana Jannay mudan, tii diidana ciqaabay mudan iyo cadaab, Cumar Binu Khadhaab waxaa laga wariyey: Waa labadii dambilayaal ee Quresh Binu Muqira iyo Binu Umaya, Binu Muqirase waxaa la halaagay Maalintii Badar, Binu Umayase waxaa loo raaxeyey muddo. Ibraahiim (24-30).

31. ku dheh addoomadayda rumeeyey (Xaqa) ha oogen salaadda hana ka Nafaqeyeen waxaan ku arsaaday qarsoodi iyo muuqba ka hor imaatin Maalin aan gadasho iyo saaxiib jirin (qiyaamada).

قُلْ لِعِبَادِيَ الَّذِينَ آمَنُوا يُقِيمُوا الصَّلَاةَ وَيَدْعُوا
مِمَّا رَزَقْنَاهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَ
يَوْمٌ لَا يَبِيعُ فِيهِ وَلَا يَخْتَلَى ﴿٣١﴾

32. Eebe waa kan Abuuray samooyinka iyo dhulka kana soo dejiyey samada Biyo kuna soo bixiyey midho rizqigiinna dartiis, idiinna sakhiray doonta inay ku socoto badda amarka Eebe idiinna sakhiray Wabiyada.

اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَأَنْزَلَ مِنَ
السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجَ بِهِ مِنَ الثَّمَرَاتِ رِزْقًا لَكُمْ
وَسَخَّرَ لَكُمْ الْفَلَكَ لِتَجْرِيَ فِي الْبَحْرِ بِأَمْرِهِ
وَسَخَّرَ لَكُمْ الْأَنْهَارَ ﴿٣٢﴾

33. idiinkuna sakhiray Qorraxda iyo Dayaxa si joogta ah idiinna sakhiray habeenka iyo Maalinta.

وَسَخَّرَ لَكُمْ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ دَائِبَيْنِ
وَسَخَّرَ لَكُمْ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ ﴿٣٣﴾

34. idinkana siiyey wax kastood warsataan, haddaad tirisaanna Nicmada Eebana ma koobi Kartaan, dadse waa dulmi badane gaalnimo badan.

وَمَا آتَاكُمْ مِنْ كُلِّ مَا سَأَلْتُمُوهُ وَإِنْ تَعُدُّوا
نِعْمَتَ اللَّهِ لَا تَحْصُوهَا إِنَّ الْإِنْسَانَ لَظَلُومٌ
كَفَّارٌ ﴿٣٤﴾

35. xusuusta markuu Nabi Ibraahim yidhi Eebow ka yeel baladkan (Maka) Aamin igana dheeree ani iyo caruurtayda inaan caabudno Sanamyada.

وَإِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ رَبِّ اجْعَلْ هَذَا الْبَلَدَ آمِنًا
وَاجْنُبْنِي وَبَنِيَّ أَنْ نَعْبُدَ الْأَصْنَامَ ﴿٣٥﴾

36. Eebow waxay dhumiyeen wax badan oo dada, ciddii raacdana waa iga mid tii i caasidana adaa danbi dhaafe naxariista ah.

رَبِّ إِنَّهُمْ أَضَلُّونَ كَثِيرًا لِقَدِّ النَّاسِ مِنْ بَعْدِي
فَإِنَّهُ رَبِّي وَمَنِ عَبَسَنِي فَإِنَّكَ عَنْ مَوْلَىٰ رَجِيمٌ ﴿٣٦﴾

Eebe wuxuu faray Addoomadiisa daacadiisa, Salaad, wax bixin qarsoodi iyo muuqba Qiyaamaha ka hor illeen wax gadasho, Ganacsi iyo saaxiibtinimo ma jirtee, Eebaha mudan cibaadadaasna waa kan abuuray Cirka iyo Dhulka kana soo dejiyey cirka Biyo cunno soo saara, una sahlay dadka markabka, Qorraxda, Dayaxa, Wabiyada, Habeenka iyo Maalinta iyo wax kastooy u baahanyihiin, siiyana addoomadiisa waxay warsadaan, Nicmada Eebe ee xaq rumeyn, Caafimaad, caqli, cilmi, rizqi iyo kuwo

kale ee badan lehna wax tiro lagu koobi karo ma aha ee waxaa loo baahanyahay in lagu mahdiyo Eebe daacadiisa, wanaagga iyo khayrna loogu dhaqmo, illeen caadada dadka waxaa ka mida dulmi iyo xaqiidiinimo. Aayadaha dambe waxay ka warrami in Nabi Ibraahim Eebe ka baryey inuu Maka ka yeelo balad Aamina kana fogaayo isaga iyo Caruurtiisaba inay sanam caabudaan illeen dad badanbaa ku dhumaye, in Nicmada Eebe lagu shugriyana waa Waajib. Abii daradaa waxaa laga wariyey: Ruuxaan Aqoonsan Nicmada Eebe korkiisa Cunno iyo cabbid mooyee waxaa yaraaday Camalkiisa waxaana soo dhawaaday cadaabkiisa. Camal fiican, dad anfac, xaq u yeedhid iyo wanaag yaa lagu mutaa gudashada shugriga Eebe. Ibraahiim (31-36).

37. Eebow waxaan dejiyey caruurtaydii (Qaar) tog aan beer lahayna oo ah Baydkaaga sharafta leh agtiisa Eebow inay Oogaan saladda ee ka yeel Quluubta dadka tii u iilata xaggooda kuna arzaaq midho inay shugriyaan.

رَبَّنَا إِنِّي أَسْكَنْتُ مِنْ دُونِ بَيْتِي بَوَادٍ غَيْرِ ذِي زَرْعٍ
عِنْدَ بَيْتِكَ الْمُحَرَّمِ رَبَّنَا لِيُقِيمُوا الصَّلَاةَ
فَلْجَعَلْ أَوْدَةَ مِنَ الْغَابِئِينَ إِلَيْهِمْ وَارْزُقْهُمْ
مِنَ الثَّمَرَاتِ لَعَلَّهُمْ يَشْكُرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Eebow adugu waxaad ogtahay waxaannu qarín iyo waxaannu Muujin, kamana Qarsoona Eebe waxba samada iyo dhulka (midna).

رَبَّنَا إِنَّكَ تَعْلَمُ مَا نُخْفِي وَمَا نُعْلِنُ وَمَا يَخْفَى عَلَى
اللَّهِ مِنْ شَيْءٍ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي السَّمَاءِ ﴿٣٨﴾

39. mahad Eebaa iska leh ee ah kan i siiyey anoo wayn Ismaaciil iyo Isxaaq Eebahayna waa maqlaha baryada (ajiibe).

الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي وَهَبَ لِي عَلَى الْكِبَرِ إِسْمَاعِيلَ
وَإِسْحَاقَ إِنَّ رَبِّي لَسَمِيعُ الدُّعَاءِ ﴿٣٩﴾

40. Eebow iga yeel mid ooga salaadda aniga iyo caruurtayda Eebow Aqbal baryadayda.

رَبِّ اجْعَلْنِي مُقِيمَ الصَّلَاةِ وَمِنْ ذُرِّيَّتِي
رَبَّنَا وَتَقَبَّلْ دُعَاءِ ﴿٤٠﴾

41. Eebow ii dambi dhaaf ani iyo Labadaydii Waalid iyo Mu'miniinta Maalinta ay kici xisaabtu (Qiyaamadu).

رَبَّنَا اغْفِرْ لِي وَلِوَالِدَيَّ وَلِلْمُؤْمِنِينَ
يَوْمَ يَقُومُ الْحِسَابُ ﴿٤١﴾

42. ha u malayn in Eebe halmaansnaya-hay waxay fali daalimiintu, wuxuu uun dib ugu dhigi maalin ay taagmi dhex-diisa indhuhu.

وَلَا تَحْسَبَنَّ اللَّهَ غَفُولًا عَمَّا تَعْمَلُ الظَّالِمُونَ
إِنَّمَا يُجِزُّهُمْ يُيُورُ تَشْخُصُ فِيهِ الْأَبْصَارُ ﴿٤٢﴾

43. oyna deg degi oo madax kor yeeli oosan soo noqonayn aragoodu (taagmi indhuhu) Quluubtooduna ay madhan-tahay «cabsi darteed».

مُهْطِعِينَ مُقْنِعِي رُءُوسِهِمْ لَا يَرْتَدُّ إِلَيْهِمْ
طَرْفُ عَيْنٍ وَأَفْتَدُ نُهُرَهُمْ ﴿٤٣﴾

Aayadaha hore waxay aad ula xidhiidhaan Aayadihii ka horreeyey, wuxuuna Nabi Ibraahim Eebe ka baryey inuu quluubta dadka u soo jecdiyo xagga baydkiisa uu ag dejiyey Caruurtiis isagoon beer la hayn, wuxuuna ka baryey inuu ku arzaaqo midho si ay cibaadada u gutaan kuuguna shugriyaan, Eebana waa ka aqbalay oo waxaa muuqda in Maka balad Nicmo tahay, waxaase loo baahanyahay camal fiican mahad Eebe iyo isu Naxariisasho, Nabi Ibraahim wuxuu isu bandhigay Eebe oo uu yidhi adaa og wax kasta wax kaa qarsoonna ma jiro, wuuna ku mahdiyey Eebaha siiyey Ismaaciil iyo Isxaaq isagoo wayn, illeen Eebaa ducada aqbalee, wuxuuna Eebe ka baryey inuu ka yeelo mid daa'ima gudashada salaadda isaga iyo carruurtiisa ducadana ka aqbalo, una dambi dhaafo isaga, Waalidiintiis, iyo Mu'miniintaba Maalinta lays xisaabin qiyaamada, maxaa ka cajib badan Nabi Ibraahim iyo Naxariistiisa iyo Xaalkiisa, tan kale Eebe ma halmaansana daalimiintu waxay fali wuxuu dib ugu dhigi Maalin Induhu taagmi Qiyaamada, oo cabsi badan Quluubtuna gilgilan cabsidarteed, dhibka qiyaame iyo culayska iyo waxyaalaha ku sugan waa wax Eebe laga magan galo loona darbado lana feejignaado, allaha sahlo. Ibraahiim (37-43).

44. uga dig dadka maalintuu u iman cadaab oy odhan kuwii dulmi falay eebow dib noogu dhig muddo dhaw aan ajiibno yeedhidaadee oon raacno rasuuladee, miyeydaan ahayn kuwii ku dhaartay horay inaydaan tegayn.

وَأَنْذِرِ النَّاسَ يَوْمَ يَا بَعْثُ الْعِزَابِ يَقُولُ الَّذِينَ
ظَلَمُوا رَبَّنَا آخِرْنَا إِلَىٰ آجَلٍ قَرِيبٍ يُجِيبُ دَعْوَانَا
وَيَسْتَجِيبُ الرُّسُلَ أُولَٰئِكَ نُوَلِّوْا أَقْسَمْتُمْ مِنْ قَبْلُ
مَا لَكُمْ مِنْ زَوَالٍ ﴿٤٤﴾

45. oo degteen guryihii kuwii dulmiyey naftooda oo idiin caddaaday sidaan ku fallay iyagii oon idiin yeellay tusaalayaal.

وَسَكَتُمْ فِي مَسْجِدِ الَّذِينَ ظَلَمُوا أَنفُسَهُمْ وَتَبَيَّنَ
لَكُمْ كَيْفَ فَعَلْنَا بِهِمْ وَضَرَبْنَا لَكُمُ
الْأَمْثَالَ ﴿٤٥﴾

46. iyagoo dhagar samayn Eebe agtiisaana Abaalka dhagartoodu yahay, dhagartooduna ma aha mid la suulaan (tagaan) Buuruhu.

وَقَدْ مَكَرُوا مَكْرَهُمْ وَعِنْدَ اللَّهِ مَكْرُهُمْ وَإِنْ
كَانَ مَكْرُهُمْ لِيُرْوَلْ مِنْهُ الْجِبَالُ ﴿٤٦﴾

47. ee ha u malayn in Eebe baajin u yabooha Rasuulladiisa illeen Ilaahay waa adkaade aarsadee.

فَلَا تَحْسَبَنَّ اللَّهَ مُخْلِيفَ وَعْدِهِ رُسُلُهُ
إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ ذُو انْتِقَامٍ ﴿٤٧﴾

48. Maalin Buuna (oofin) lagu bedeli dhulka Dhul kale iyo Samooyinkaba, waxaana loo soo bixi Eebaha kalida ah ee awoodda sara leh.

يَوْمَ تَبْدُلُ الْأَرْضَ عَرْضَ الْأَرْضِ وَالسَّمَوَاتِ
وَيَرْزُقُ اللَّهُ الْوَّاحِدَ الْقَهَّارَ ﴿٤٨﴾

Eebe wuxuu faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu uga digo dadka cadaab daran ka hor intayan warsan in dib loo dhigo muddo yar si ay u maqlaan xaqa Rasuuladana u raacaan, waxayse horay ugu dhaarteen inayn ka guurayn adduunka, iyagoo waliba degay guryihii kuwii ka horreeyey ee daalimiinta ahaa ee la halaagay, una cadaatay sida Eebe ku falay, hadana gaaladu dhagar iyo khiyaanad kama daayaan xaqa iyo Mu'miniinta, inkastoon dhagartoodu buuro jajabinayn, ooyse u dhawdahay, Eebana baajinmaayo ballan qaadkiisii ahaa inuu Rasuullada u gargaari, waana adkaade aarsada Maalin dhulka iyo cirka lagu badali dhul kale iyo cir kale, dhammaan dadkuna u soo

bixi Eebaha kalida ah ee awoodda sare, waana maalinta Qiyaame. Waxaa Bukhaari iyo Muslim ku sugnaaday in dadka lagu soo kulmin maalinta Qiyaame dhul cad oo nadiifa oon cidna calaamo ku lahayn, siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebase wuu u Naxariisan Mu'miniinta xaqa raacay ee si dhab ah u caabudday, wuxuuna ciqaabi xaq diidayaasha Gaalada ah ee khayaamada, dhagarta, dhuminta iyo xumaanoo dhan u maleegi xaqa iyo Islaamka, adduunkase waa in lagu dulleeyo gacmaha muslimiinta, Aakhirana waa inay la kulmaan wax madaxooda ka wayn oo ciqaab iyo dulli ah. Ibraahiim (44-48).

49. Waxaadna arkaysaa Danbiilayaashii oo Maalintaas lagu xidhiidhiyay (lays kulaxidhay) Biro (Naareed).

وَتَرَى الْمَجْرِمِينَ يَوْمَئِذٍ مُّقَرَّنِينَ
فِ الْأَصْفَادِ ﴿٤٩﴾

50. Dharkooduna (Qamiisyadoodu) waa Daamur (Naara) waxaana dabooli wajigooda naar.

سَرَابِلُهُمْ مِّنْ قَطِرَانٍ وَتَغْشَىٰ وُجُوهَهُمُ النَّارُ ﴿٥٠﴾

51. inuu ka Abaal mariyo Eebe naf kasta Waxay kasbatay, Eebana way deg degtaa xisaabtiisu.

لِيَجْزِيَ اللَّهُ كُلَّ نَفْسٍ مَا كَسَبَتْ إِنَّ اللَّهَ
سَرِيعُ الْحِسَابِ ﴿٥١﴾

52. Quraankana waa gaadhsiiin Dadka iyo in Loogu Digo iyo inay ogaadaan in Eebe Ilaah Kaliya uun Yahay, iyo inay waantooto Cidda Caqliga leh (Mu'miiniinta).

هَذَا بَلَّغٌ لِّلنَّاسِ وَلِيُنذِرُوا بِهِمْ وَيَعْمُرُوا أَنَّمَا
هُوَ إِلَٰهُ وَحْدٌ وَيُنذِرَ أُولَٰئِكَ الْبَابِ ﴿٥٢﴾

Eebe cidna ma dulmiyo ee dadku iyagaa Naftooda Dulmiya, Maalinta xisaabta ee Qiyaamana Cid walba waxaa laga abaal marin Camalkeeda, Waxaana Danbiilayaasha Gaaloobay la isugu xidhxidhi kooxo iyo labolabo iyagoo loo xidhi Dhar Naara wajigoodana Naaru dabooli, Taasina waa in Eebe ka abaal marin Ruux kasta wuxuu kasbaday, oy Eebana deg degto Xisaabtiisu, Quraankuna waa xaq Iyo war Dhab ah oo cad Kana soo fulay Xaakimka awoodda badan ee wax kasta ku hoos jiraan, Ilaaheenne wayn, lana gaadhsiiin Aduunka iyo Dadkoo Dhan, si Loogu digo, iyo inay Ogaadaan in Eebe ilaah kaliya yahay oy kuna waano qaataan kuwa Caqliga leh. Taasina waxay ku tusin in Dambiiilayaasha la abaal marin, in Quraanku iyo Diinta islaamku Caalami Yahay'dadkoo dhanna ay Waajib ku tahay Rumayntiisu, Raacidiisa, ku dhaqankiisa, ugu yeedhidda Dadka, Ogaansho inuu u suubado wakhti kasta, in wanaag ku dhan yahay, inuu yahay jidkii Jannada iyo Liibaan adduun iyo Aakhiroba. Ibraahiim (49-52).



Suurat Al-Xijr

سُورَةُ الْحَجَرِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Xarfaha hore waa la soo sheegay Macnahooda, Kuwanna waa Aayadaha Kitaabka iyo Quraanka cad.

الرَّ تِلْكَ آيَاتُ الْكِتَابِ وَقُرْآنٍ مُبِينٍ ﴿١﴾

2. Wax badanbay tamannin (jeclaan) kuwii Gaalobay (Aakhiro) inay Muslimiin ahaadaan (adduunkii).

رُبَّمَا بَوَّأُوا لِلَّذِينَ كَفَرُوا لَوْ كَانُوا مُسْلِمِينَ ﴿٢﴾

3. ka tag ha cuneen hana raaxaysteene Hana Shuqliso yididdiilo way ogaan doonaane.

ذَرَهُمْ بَأْكَرًا لَوْ وَتَمَتَّعُوا وَيَلْتَمِهُمُ الْآمَلُ فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ﴿٣﴾

4. Magaalo la halaago oo kasta waxaa u sugnaaday Wakhti la yaqaanno.

وَمَا أَهْلَكْنَا مِنْ قَرِيْبَةٍ إِلَّا وَلَهَا كِتَابٌ مَّعْلُومٌ ﴿٤﴾

5. Kamana hor marto ummadi Ajasheeda (wakhtigeeda) Kamana dib marto.

مَا تَسْبِقُ مِنْ أُمَّةٍ أَجَلَهَا وَمَا يَسْتَفْخِرُونَ ﴿٥﴾

6. Waxay dhaheen kan Quraanka lagu soo dejiyayow Adugu waad waalan tahay.

وَقَالُوا يَا أَيُّهَا الَّذِي نُزِّلَ عَلَيْهِ الذِّكْرُ إِنَّكَ لَمَجْنُونٌ ﴿٦﴾

7. Maad malaa'ig noo keentid haddaad run Sheegi.

لَوْ مَا تَأْتِيْنَا بِالْمَلَأِكَةِ إِنْ كُنْتَ مِنَ الصَّادِقِينَ ﴿٧﴾

8. Umana soo Dejinno malaa'igta xaq mooyee lamana sugen Gaalada (mar-kaas).

مَا نُنزِّلُ الْمَلَأِكَةَ إِلَّا بِالْحَقِّ وَمَا كَانُوا إِذَا مُنْظَرِينَ ﴿٨﴾

9. Annagaa soo dejinnay Quraanka annagaana Dhawri.

إِنَّا نَحْنُ نُنزِّلُ الذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُ لَحَافِظُونَ ﴿٩﴾

Quraanku waa Kitaab xaq ah, suganna oo Eebe soo dejiyay, Gaaladuna markay ku Kaliyoobaan Naarta oo Dadkii Caasiyiinta ahaa ee Muslimiintad ahaa laga saaro Naarta yay Shallaayi waxay Muslimiin u noqon waayeen, Waase la dhaafay Saacadeedii, waqti Calaacalna wuu Dhammaaday ee waa uun Janno mu'min iyo Naar danbiilayaal, illeen Adduunkii yay iska cuncen oy isaka raaxeysteen iyagoo Xaqa Beeniyay Wayse arki waxa ku Dhaca Aakhiro, Cid kastana mudday leedahay ayna ka hor marayn kana dib marayn marka la halaagi, marka xaqa loo Caddeeyo. Gaaladii waxay ku sheegeen Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu waalan yahay waxayna warsadeen in malaa'ig Loo soo Dejiyo, Malaa'igtu Farriin ama halaag unbay la soo Degtaa.

Tan kale Eebaa quraanka soo Dajiyay isagaana Ilaalin, Eebana wakaas ka Dhawray Quraanka Halmaansho, Baddalaad, leexin, nusqaamin iyo wixii ku Dhacay Kutubihii hore oo leexin ah, Waxaadna aragtaa in Malaayiin muslimiina Xifdisantahay meelo kala duwan oo Caalamka ah, waxaa kaliya ee loo Baahanyahay in lagu Dhaqmo, lagana qaato xukunka, mucaamilada, maamulka iyo wax kastoo Noloshu taaban, illeen waa kitaab adduun iyo Aakhiree, Mase aha siday rabaan Gaaladu iyo Jaahiliintu inuu noqdo kitaab Aakhiro kaliya. Al-Xijr (1-9).

10. waxaan u dirray hortaa (rasuullo) Ummadihii hore.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ فِي شَيْعِ الْأَوَّلِينَ ﴿١٠﴾

11. Rasuul kasta oo u yimaaddana waxay ahaayeen kuwo ku jeesjeesa.

وَمَا يَأْتِيهِمْ مِنْ رَسُولٍ إِلَّا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ ﴿١١﴾

12. saasaana u galinaa (Gaalnimada) quluubta dambiilayaasha.

كَذَلِكَ نَسُفُّكَ فِي قُلُوبِ الْمُجْرِمِينَ ﴿١٢﴾

13. mana rumeeyaan Quraanka waxaana tegay (hor maray) sumaddii «Jidkii» kuwii horreeyey.

لَا يُؤْمِنُونَ بِهِ وَقَدْ خَلَتْ سُنَّةُ الْأَوَّلِينَ ﴿١٣﴾

14. haddaan uga furro korkooda irrid samada ooy ahaadaan kuwo kora.

وَأَوْفَوْا عَنْ آيَاتِهِمْ بَابِغِنَاءٍ السَّمَاءِ فَظَلُّوا

فِيهِ يَعْجُونَ ﴿١٤﴾

15. waxay odhan lahaayeen waxaan uun la awwday (La tiray) aragyadannadii, waxaabanse nahay qoom la sixray.

لَقَالُوا إِنَّمَا سَكَّرَتْ أَنْصُرُنَا بَلْ نَحْنُ

قَوْمٌ مُسْحُورُونَ ﴿١٥﴾

16. waxaan yeellay samada buruuj (Meelo) waxaan u qurxinnay kuwa dayi (eegi).

وَلَقَدْ جَعَلْنَا فِي السَّمَاءِ بُرُوجًا وَرَبَّيْنَاهَا

لِلنَّظِيرِ ﴿١٦﴾

17. waxaan ka dhawray shaydaan la tuuray «fogeeyey» dhammaantiis.

وَحَفِظْنَا نَهَا مِنْ كُلِّ شَيْطَانٍ رَجِيبٍ ﴿١٧﴾

18. mid dafa maqalka oo danab cad raaco mooyee.

إِلَّا مِنْ أَسْرَقَ السَّمْعَ فَاتَّبَعَهُ، شِهَابٌ مُبِينٌ ﴿١٨﴾

19. dhulkana waan fidinay waxaana ku ridnay «sugnay» dhexdeeda Buuro, waxaana ka soo bixinay wax kasta oo Miisaaman.

وَالْأَرْضِ مَدَدْنَاهَا وَأَلْقَيْنَاهَا رِوْسًا وَأَنْبَتْنَا فِيهَا

مِنْ كُلِّ شَيْءٍ مُورُونَ ﴿١٩﴾

20. waxaana idiinka yeellay dhexdiisa
nolol iyo waxaydaan arzaa'iqi karin.

وَجَعَلْنَا لَكَ فِيهَا مَعَدِيَشَ وَمَنْ لَسْتُمْ
لَهُ يُرَاقِبِينَ ﴿٢٠﴾

Eebe wuxuu u diray Rasuullo Ummadihii hore, wayna ku jeesjeesi jireen Rasuul kasta, saasayna Quluubtooda xumaan loo galiyey ooyen Quraanka iyo xaqa u rumeynin, wax badan baana la halaagay hortood, Gaalnimadooda iyo madax adaygooda, haddii samadaa irdaha looga furo oo ay koraan waxay dhihi lahaayeen waa nala indho awday oo xaq ma aragno waana nala sixray, siday - sheegeen kuwo kor u baxay -, samadana Eebe wuxuu yeelay Manaasil iyo qurux ciddii eegi oo ku waano qaadan waana laga dhawray shaydaan mid maqalka dafa oo danab raaco mooyee, dhulkana wakaa Eebe fidiyey buurana ku sugay, Cunno miisaamanna ka soo saaray, Nololna dadka u dhexyeelay iyaga iyo waxayna arzaa'iqi karin oo xoola ah, Eebaa wayn, wataas awoodiisu iyo khalqigiisu iyo naxariistiisu iyo nicmooyinkiisu yaase ku waano qaadan oo rumeyn, oo ku mahdin oon Mu'iniinta ahayn. Al-Xijr (10-20).

21. waxaan agtanada khasnadihiisu
«kaydkiiisu» ahayn ma jiro, umana soo
dejinnu qaddar la ogyahay mooyee.

وَإِنْ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا عِنْدَنَا خَزَائِنُهُ وَمَا نُنزِلُهُ إِلَّا
بِقَدَرٍ مَعْلُومٍ ﴿٢١﴾

22. waxaana dirnaa dabaysha oo Tal-
laasha (Daruurta) waxaana ka soo
dajinaa samada Biyo aan idinku waraa-
binno idinkoon ahayn kuwo ka keydsan
kara (gudhidda).

وَأَرْسَلْنَا الرِّيحَ لَوْفِحَ فَاَنْزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مَاءً
فَأَسْقَيْنَاكُمُوهُ وَمَا أَنْتُمْ لَهُ بِخَافِرِينَ ﴿٢٢﴾

23. annagaa wax nooleeyna waxna dilla,
anagaana wax dhaxalla uun (u hadha).

وَإِنَّا لَنَحْنُ نُحْيِيهِ وَنُمِيتُهُ وَنَحْنُ الْوَارِثُونَ ﴿٢٣﴾

24. waxaana ognahay kuwiinna hor
maray waxaana ognahay kuwiinna dib
maray.

وَلَقَدْ عَلِمْنَا الْمُسْتَقْدِمِينَ مِنْكُمْ وَلَقَدْ عَلِمْنَا
الْمُسْتَخِيرِينَ ﴿٢٤﴾

25. Eebahaana isagaa soo kulmin dadka
waana falsame oge ah.

وَإِنَّ رَبَّكَ هُوَ يَحْشُرُهُمْ إِنَّهُ حَكِيمٌ عَلِيمٌ ﴿٢٥﴾

26. annagaana ka abuuray dadka
dhoobo doorsoon.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ مِنْ صَلْصَالٍ مِنْ حَمَإٍ مَسْنُونٍ ﴿٢٦﴾

27. Jaankana (Jinniga) waxaan ka
abuuray mar hore Naar samuum leh
(Kulayl).

وَالْجَانَّ خَلَقْتَهُ مِنْ قَبْلِ أَنْ نَارِ السَّمُورِ ﴿٢٧﴾

Wax kasta Eebe agtiisa wuxuu ku lecyahay khasnad iyo meel kayd, wax walbana wuxuu ku lecyahay Eebe agtiisa qaddar la yaqaanno, dabayshana Eebaa soo dira si ay u tallaasho daruuraha, Samadana Eebaa uga keena kana waraabiya iyagoon kaydsan karin hadday gudhaan oo ceelku ama Wabigu ingayo, Eebaana wax nooleeyee waxna dila, una hadhi dhulka marka khalqigu halaagsamo isagaana og ciddii hor mari iyo tii dib mari, ama camalfiican iyo camal xun ama geeri iyo nolol ama jahaadka iyo ka tagiddiisa, Eebaana dhammaan soo kulmin illeen waa falsame wax walba oge.

Dadkana Eebaa asalkoodii ka abuuray carro doorsoon, Jinnigana ka abuuray Naar kulul, Aayaduhuna waxay ku tusin in wax walba kaydkooda Eebe agtiis yaal, in waxkasta qaddar la yaqaan lecyahay, in Eebe inoogu naxariisto Roobka iyo Biyaha, wax Eebe ka soo hadhay oo kaydin karana jirin, Geeri iyo

Nololla Eebaa haya, isagaana baaqi ah, ciddii hor mar sheegan iyo Mid Dib u dhac ku yimidna Eebaa oge ma aha war iyo hadal layska yidhi, in Eebe soo kulmin dadka, in Eebe Dadka assalkoodii Nabi Aadan ka abuuray carro doorsoon, oyan ahayn siday gaalada doqomada ah ee wax u dhiman yihiin sheegi, iyo in Jinniga laga abuuray Naar. Waxaa soo dhanna waxay sugi Cibaadada iyo xaqnimada Eebe. Al-Xijr (21-27).

28. Xusuuso markuu ku yidhi Eebahaa malaa'igta Anugu waxaan ka abuuri Dad dhoobo doorsoon.

وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلٰئِكَةِ اِنِّيْ خَلِقُ بَشَرًا مِّنْ صَلٰصِلٍ مِّنْ حَمَإٍ مَّسْنُوْنٍ ﴿٢٨﴾

29. Ee markaan ekeeyo kuna afuufo dhexdiisa Ruuxdayda ugu dhaca Sujuud.

فَاِذْ اَسْوَيْتُهُ وَوَقَفْتُ فِيْهِ مِنْ رُوْحِيْ فَقَعُوْا اَلِهٖٔ سٰجِدِيْنَ ﴿٢٩﴾

30. wayna Sujuudeen malaa'igtii dhammaan oo Kulansan.

فَسَجَدَ الْمَلٰئِكَةُ كُلُّهُمْ اٰجْمَعُوْنَ ﴿٣٠﴾

31. Iblis oo diiday inuu ka mid noqdo kuwa Sujuuday mooyee.

اِلَّا اِبْلِيسَ اَنَّىٰ اَنْ يَّكُوْنَ مَعَ السّٰجِدِيْنَ ﴿٣١﴾

32. Wuxuuna yidhi (Eebe) Iblisow maxaad leedahay oodan u noqonin kuwa Sujuuda.

قَالَ يَا اِبْلِيسُ مَا لَكَ اَلَّا تَكُوْنَ مَعَ السّٰجِدِيْنَ ﴿٣٢﴾

33. Wuxuuna yidhi ma ihi Mid u sujuudi dad aad ka Abuurtay Dhoobo doorsoon.

قَالَ لَئِمْ اَكُنْ لَّا سَجِدُ لِبَشَرٍ خَلَقْتَهُ مِنْ صَلٰصِلٍ مِّنْ حَمَإٍ مَّسْنُوْبٍ ﴿٣٣﴾

34. Wuxuuna yidhi Eebe ka bax xageeda adigu waa lagu fogeeyaye.

قَالَ فَاخْرُجْ مِنْهَا فَاِنَّكَ رَجِيْمٌ ﴿٣٤﴾

35. Korkaagana waxaa ah Lacnad tan iyo Maalinta Abaal marinta (Qiyaamada).

وَإِنَّ عَلَيْكَ اللَّعْنَةَ اِلَىٰ يَوْمِ الدِّيْنِ ﴿٣٥﴾

36. Wuxuuna yidhi Eebow i sug tan iyo maalinta La soo bixin dadka.

قَالَ رَبِّ فَأَنْظِرْنِيْ اِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُوْنَ ﴿٣٦﴾

37. Wuxuuna yidhi Eebe Adugu kuwa la sugi Yaad ka mid tahay.

قَالَ فَاِنَّكَ مِنَ الْمُنظَرِيْنَ ﴿٣٧﴾

38. Tan iyo maalinta Wakhtiga la yaqaan leh.

اِلَىٰ يَوْمِ اَلْوَقْتِ الْمَعْلُوْمِ ﴿٣٨﴾

Abuuridda Nabi aadan iyo sida Eebe u faray Malaa'igta inay u sujuudaan Iyagoo salaami een Caabudaynin, iyo sida Iblis u diiday, Isagoo iska Kibriyay oo u Sheegan jaahilnimo Inuu ka Asal fiican yahay iyo Sida Eebe U lacnaday naxariistiisana uga Dheereeyay, loona sugay tan iyo Maalinta Dadka la soo bixin dhammaan waxaa lagaga sheegay Quraanka meelo Badan, Waxaase loo Baahanyahay uun in la ogaado in Iblis iyo xisbigiisu oo ah Inta gaalnimada iyo Xumaanta ku Raacday ay Col u yihiin

Mu'miniinta, Islamka Quraanka iyo Wanaaga, saas darteed waa in laga digtoonaado Colna laga yeesho Samahana lagu Dadaalo. Al-Xijr (28-38).

39. Wuxuuna yidhi Iblis Eebow i baadiyayntaada Darteed waxaan u Qurxin dhulka Dhexdiisa waana Dhu-min dhammaan.

قَالَ رَبِّ إِنَّمَا أَتَوَيْتَنِي لَأَزِيدَنَّ لَهُمُ فِي الْأَرْضِ
وَلَأُخَوِّبَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٣٩﴾

40. Addoomadaada cibaadada kuu kali Yeelay mooyee (lana doortay).

إِلَّا عِبَادَكَ مِنْهُمْ الْمُتَحَصِّنِينَ ﴿٤٠﴾

41. Eebe wuxuu yidhi kaasi waa Jid igu toosan (oo layska abaal marin).

قَالَ هَذَا صِرَاطٌ عَلَيَّ مُسْتَقِيمٌ ﴿٤١﴾

42. Addoomadayda (toosan) Kuma lihid xujo Cid Ku raacday oo kuwa Baadida ah ka mida Mooyee.

إِنَّ عِبَادِي لَيْسَ لَكَ عَلَيْهِمْ سُلْطَانٌ إِلَّا
مَنْ أَتَبَعَكَ مِنَ الْعَالَمِينَ ﴿٤٢﴾

43. Jahanamaana yaboohoodu yahay (inta dhunta) Dhammaan.

وَأَنَّ جَهَنَّمَ لَمَوْجِدُهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٤٣﴾

44. Waxayna leedahay todoba irridood oo irrid Kastana waxay leedahay Qad-dar loo qaybiyay (oo Iblis iyo Colkiisa ah).

لَهَا سَبْعَةٌ أَبْوَابٍ لِكُلِّ بَابٍ مِّنْهُمُ
جُزْءٌ مَّقْسُومٌ ﴿٤٤﴾

Eebe wuu dhumiyey Iblis, isna wuxuu ku dhaartay inuu dhumiyo dadka dhammaan marka laga reebo addoomada Eebe ee toosan, kuwaasna Iblis jid kuma leh, waxayna mudan Iblis iyo inta raacday Naarta Jahannamo oo Toddobo irridood leh, irrid kastana loo darbay ciddii gali lahayd oo ah Iblis iyo colkiisa (Eebe ha naga koriyee) irida-haasna waxay u kala gali sida loo sii kala xunyahay. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Jahannama waxay leedahay Toddoba iridood waxaana ka mid ah irrid uu ka gali ruuxii u siibta seefta ummadayda. waxaa wariyay Tirmidi. Calibinu abii dhaalib (Eebe ha ka raalli noqdee) wuxuu yidhi: Iridaha Jahannamo waa Toddoba is korsaaran, waana la buuxin dhammaan. Waa wax Eebe laga magan galo. Camal fiican oo ah Eebe caabudid dhaba, Raacid Quranakiisa, Adeecidda Rasuulkiisa iyo xaq ku socod yaana lagaga koraa. Al-Xijr (39-44).

45. kuwa Eebe ka dhawrsadan waxay gali Janooyin iyo Ilo (durduri).

إِنَّ الْمُنْتَفِعِينَ فِي جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ ﴿٤٥﴾

46. waxaana la dhahaa ku gala Nabad galyo iyo Aaminimo.

أَذْكُلُوهَا إِسْلَامًا مِنَّامِينَ ﴿٤٦﴾

47. waxaana ka siibnaa waxa laabtooda ku jira oo xiqdi ah, waana walaalo sariira isqaabilsan ku sugan.

وَنَزَعْنَا مَا فِي صُدُورِهِمْ مِنْ غَلِيٍّ إِخْوَانًا
عَلَىٰ سُرُرٍ مُّتَقَابِلِينَ ﴿٤٧﴾

48. kumana taabto jannada dhexdeeda dhib xageedana lagama Bixiyo.

لَا يَمَسُّهُمْ فِيهَا نَجَسٌ وَمَا هُمْ بِمَنْهَا
بِمُخْرَجِينَ ﴿٤٨﴾

49. U warran addomadayda inaan anugu Danbi dhaafe Naxariista ahay.

﴿٤٩﴾ نَبِيِّ عِبَادِي أَنِّي أَنَا الْغَفُورُ الرَّحِيمُ

50. iyo in Cadaabkaygu uu yahay Cadabka daran uun.

﴿٥٠﴾ وَأَنَّ عَذَابِي هُوَ الْعَذَابُ الْأَلِيمُ

51. Ugana waran dadka Martidii (Malaa'ig) Nabi Ibraahim.

﴿٥١﴾ وَيَدِينَهُمْ عَن ضَعِيفِ إِبْرَاهِيمَ

52. Markay u soo galeen kuna Dhaheen salaam Kuna yidhi waanu idinka cabsan.

﴿٥٢﴾ إِذْ دَخَلُوا عَلَيْهِ فَقَالُوا سَلَامًا قَالَ إِنَّا

﴿٥٢﴾ مِنْكُمْ وَيَجِئُونَ

53. ooy Dhaheena ha cabsan Waxaanu kuugu Bishaarayn Wiil cilmi yeelane.

﴿٥٣﴾ قَالُوا لَا تَوْحَلْ إِنَّا نَبَشِّرُكَ بِغُلَامٍ عَلَيْكَ

54. Wuxuuna ku yidhi Ma waxaad ii bishaaraynaysaan Anoo odaynimo Itaabatay, Maxaad iigu Bishaaraynaysaan.

﴿٥٤﴾ قَالَ أَبَشْرُ تَمُونِي عَلَىٰ أَنْ مَسَّيَ الْكَبِيرَ

﴿٥٤﴾ فِيمَ تُبَشِّرُونَ

55. Waxayna dhaheen waxaanu Kuugu Bishaarayn Xaq ee ha noqonin Mid quusta.

﴿٥٥﴾ قَالُوا بَشْرُ نَفِكَ بِالْحَقِّ فَلَا تَكُن مِّنَ

﴿٥٥﴾ الْفٰئِظِينَ

56. Wuxuuna yidhi yaa ka Quusta Naxariista Eebihis kuwa Baadida ah mooyee.

﴿٥٦﴾ قَالَ وَمَنْ يَقْنَطُ مِن رَّحْمَةِ رَبِّهِ إِلَّا الضَّالُّونَ

Eebe wuxuu raaciyay Xaalka mu'miniinta oo ah inay Janno aan xiqdi iyo Xasad iyo Xumaan iyo Dhib Lahayn ay gali iyagoo Walaalo ah isasoo Qaabilina, Eebana Waana dambi dhaafe, waana Ciqaabe, Waana in Dambi dhaaf la warsado. Cadaabkiisana laga digtoonaado. Aayadaha kalana waxay ka Warrami sida meelo Kale oo Quraanka ah lagu Sheegay Nabi Ibraahim iyo Malaa'igtii Bishaarada U waday iyo Siduu uga yaabay iyo siday u xasiliyeen uguna Bishaareeyeen Markuu Sheegtay inuu Duq yahayna ay u sheegeen inay Dhab u wadaan kana Quusan naxariista Eebe, Wuxuuse u sheegay in Naxariista Eebe ka Quustaan Kuwa dhumay, Saas darteed waa in Eebe la rumeeyo Naxariistiisana la Rajeeyo Iyadoo la camal Fali. Al-Xijr (45-65).

57. Wuxuu yidhi Xaalkiinnu muxuu yahay Kuwan la Soo dirayaw.

﴿٥٧﴾ قَالَ فَمَا خَطْبُكُمْ أَيُّهَا الْمُرْسَلُونَ

58. Waxayna dhaheen waxaa naloo Diray Qoom Danbiilayaal ah xagood.

﴿٥٨﴾ قَالُوا إِنَّا أُرْسِلْنَا إِلَىٰ قَوْمٍ مُّجْرِمِينَ

59. Ehelka (nabi) Luudh mooyee oo Waanu korin Dhammaantood.

﴿٥٩﴾ إِلَّا آلَ لُوطٍ إِنَّا لَمَجْرُومٌ أَحْمَدِينِ

60. Haweenaydiisa mooyee oo noqon Kuwa ku Hadhi (Halaagga).

﴿٦٠﴾ إِلَّا أَمْرًا نُّهَىٰ فَعَدَّزْنَا إِنهَآ لَمِنَ الْغَآئِبَاتِ

61. Markay u yimaadeen Ehelkii nabi Luundh kuwii La soo diray.

فَلَمَّا جَاءَ آلَ لُوطٍ الْمُرْسَلُونَ ﴿١١﴾

62. Wuxuu yidhi Idinku waxaad Tihiin Qoom aan la Garanaynin.

قَالَ إِنَّكُمْ قَوْمٌ مُّكَرُونَ ﴿١٢﴾

63. Waxayna dhaheen saas ma aha ee Waxaannu kuula Nimid waxay Shaki-sanaayeen (Halaagoodii).

قَالُوا بَلْ جِئْنَاكَ بِمَا كُنَّا فِئْتَمَّةً يُرَوِّتُ ﴿١٣﴾

64. Waxaana kuula nimid Xaq, runna waan sheegaynaa.

وَأَتَيْنَاكَ بِالْحَقِّ وَإِنَّا لَصَادِقُونَ ﴿١٤﴾

65. Ee guuri Ehelkaaga qayb Habeenka ka mida Socona Gadaashooda yayna soo Milicsan Ruux ka Mida (Dib) kuna socda meesha Laydin Faray.

فَأَسْرَأْ بِأَهْلِكَ يَقْطَعُ مِنَ اللَّيْلِ وَأَتَّبِعْ أَدْبَارَهُمْ وَلَا يَلْتَفِتْ مِنْكُمْ أَحَدٌ وَأَمْضُوا حَيْثُ تُؤْمَرُونَ ﴿١٥﴾

66. Waxaana u waxyoonaay Amarkaas ah in Cidhibta Kuwaas la goyn Sub-axdii.

وَقَضَيْنَا إِلَيْهِ ذَٰلِكَ الْأَمْرَ أَنَّ دَابِرَ هَٰؤُلَاءِ مَقْطُوعٌ مُّصْبِحِينَ ﴿١٦﴾

Nabi Ibraahim Wuxuu warsady Xaalkooda, Waxayna u Sheegeen in loo Soo diray Inay Halaagaan Qoomka nabi Luudh ee Dandiilayaasha ah Ehelkiisa oon Haweenaydiisu Kujirin mooyee oo iyada la halaagi, Markay Nabi luudh u yimaadeenna Wuu garan Waayay, waxayna u sheegeen inay ula yimaadeen Waxay Shakisnaayeen oo ah Halaagooda, Wuxuuna Eebe faray inuu guuriyo Ehelkiisa uuna Daba socdo dibna Cidi soo eegin una Socdaan meeshii la Faray, Waxaana loo waxyooday Nabi luudh In xaalka Kuwaas lagu dhameeyay in la Cidhibgoyn Aroortii.

Waxayna ku tusin wanaagga in la isu bishaareeyo Inaan qaraabanimo dadka hanuunin karin inkastoooy Waajib tahay in Qaraabada lagula dadaalo khayr iyo Dadkaba dhammaan, In Eebe ka Aarsan danbiilayaasha, in Amarka Eebe Fuli iyo in Ilaahay laga Xidhnaado xaqana la raaco isaga unbaa wax tariye. Al-Xijr (57-66).

67. Waxaana yimid dadkii Baladka oo bishaaraysan (aragga martida).

وَجَاءَ أَهْلَ الْمَدِينَةِ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿١٧﴾

68. Wuxuuna yidhi kuwan waa Marti-daydii ee Ha igu ceebaynina.

قَالَ إِنَّ هَٰؤُلَاءِ ضَيْفِي فَلَا تَفْضَحُونِ ﴿١٨﴾

69. kana dhawrsada Eebe hana i dul-laynina.

وَأَتَقُوا اللَّهَ وَلَا تَحْزُونِ ﴿١٩﴾

70. Waxayna dhaheen Miyaanaan kaa Reebin Caalamka (inaad marti galiso cidna).

قَالُوا أَوْلَمْ نُنهَكْ عَنِ الْعَالَمِينَ ﴿٢٠﴾

71. wuxuuna yidhi Kuwaasi waa gabd-hahaygii Hadaad wax Falaysaan (ood guursanaysaan).

قَالَ هَٰؤُلَاءِ بَنَاتٌ إِن كُنتُمْ فَاعِلِينَ ﴿٢١﴾

72. Cimrigaagee iyagu Baadibay ku Wareersan Yihiin.

لَعَمْرُكَ إِنَّهُمْ لَفِي سَكْرَتِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿٧٢﴾

73. Waxaana qabatay Qayladii qorrax soo baxa.

فَأَخَذَتْهُمُ الصَّيْحَةُ مُشْرِقِينَ ﴿٧٣﴾

74. Waxaana ka yeellay korkoodii hoostooda Waxaana ku soo daadinnay Korkooda Dhagaxyo Naar ah.

فَجَعَلْنَا عَلَيْهِمَا سَافِلَهُمَا وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِمْ حِجَارَةً
مِّن سِجِّيلٍ ﴿٧٤﴾

75. Arrintaasna calaamooyin baa ugu sugan Kuwa Fiirfiiriya (Fikira).

إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّمَن تَوَسَّعَ عَيْنَيْهِ ﴿٧٥﴾

76. Waxayna kutaal Magaaladaas waddo toosan (oy maraan oo cad).

وَأَنهَآ السَّبِيلُ مُقْبِرِينَ ﴿٧٦﴾

77. Arrintaasna calaamad yaa ugu sugan kuwa Xaqa rumeeyay.

إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٧٧﴾

Dakdii Magaalada waxay soo Qaabileen martidii iyagoo dooni Caadadoodii xumayd, Wuxuuse warsaday Nabi Luudh inayna ku Ceebeeynin kuna dullaynin martidiisa, Hana guursadeen Gabdhihiisa iyo kuwa Magaalada, waxayse ku sugnaayeen wareer iyo Baadi, Halkiibaana lagu Halaagay aroortii oo la daba Gadiyay Dhagax naar Ahna lagu soo daadiyay waana Arrin lagu waano qaato ciddii fikiri ama rumayn, Wayna muuqataa meeshii lagu Halaagay. Waxaana loo baahanyahay in la Fikiro Wanaagana la raaco. Xumaantana laga Fogaado.

Abii saciid waxaa laga wariyay in Rasuulku (Naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu yidhi ka dhawrsada Saadinta Mu'minka wuxuu wax ku arkaa Nuurka Eebee (Abii xaatim) waana Faraasada. Al-Xijr (67-77).

78. Waxayna ahaayeen Qoomkii kaynta Daalimiin (Qoomkii Nabi shucayb).

وَإِن كَانَ أَصْحَابُ الْأَيْكَةِ لَطَالِمِينَ ﴿٧٨﴾

79. Waana ka aarsanay, waxayna laba-duba degenaayeen Waddo cad (oo la yaqaanno).

فَاتَّقَمْنَا مِنْهُمُ وَإِنَّهُمَا لَبِإِمَارٍ مُّبِينٍ ﴿٧٩﴾

80. Waxayna beeniyeen Qoomkii Xijri-na kuwii Loo soo diray (Saalax).

وَلَقَدْ كَذَّبَ أَصْحَابُ الْحِجْرِ الْمُرْسَلِينَ ﴿٨٠﴾

81. Waana siinay Aayaadkanagii waxayna ahaayeen Kuwa xageeda ka jeedsada.

وَأَتَيْنَهُمْ آيَاتِنَا فَكَأَنُورُاعْتَمَتْهَا مَعْضِرِينَ ﴿٨١﴾

82. Waxayna ahaayeen kuwo ka Qota Buuraha Guryo aamina.

وَكَأَنُورُأَيُّجُتُونَ مِنَ الْجِبَالِ بُيُوتَاءَ لَمِينِينَ ﴿٨٢﴾

83. Waxaana qabatay Qaylo Aroortii.

فَأَخَذَتْهُمُ الصَّيْحَةُ مُضْجِرِينَ ﴿٨٣﴾

84. Waxna uma tarin waxay Kasba-yaayeen.

فَمَا أَعْنَى عَنْهُمْ مَّا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿٨٤﴾

85. Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeyana waxaan Xaq ahayn umaanan abuurin Saacaduna way iman ee iska saamax saamixid quruxsan.

وَمَا خَلَقْنَا السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا إِلَّا بِالْحَقِّ وَإِنَّ السَّاعَةَ لَأَيُّبَةٌ فَأَصْفَحْ الصَّفْحَ الْجَمِيلَ ﴿٨٥﴾

86. Eebahaabaa ah abuuraha cilmiga lehe.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ الْخَالِقُ الْعَلِيمُ ﴿٨٦﴾

Qoomkii Nabi Shucayb iyana waxay ahaayeen Daalimiin Xaqa beenisay, waxayna Degenaaayeen iyaga iyo Qoomkii Nabi luudhaa Jid la maro oo la yaqaan oy Habboontahay in lagu waano Qaato, Sidoo kale Qoomkii Nabi saalax waxay beeniyeen Xaqii uu ula yimid iyo Mucjissadii, Kana jeedsadeen iyagoo ku Noolaa Meesha la yidhaah Xijr oo xagga Tabuug ah iyagoo Buuraha Guryo ka samaysan jiray iyagoo aamina, Waase la ciqaabay waxna uma tarin Xoolohoodii Waxaana ku Dhacay Masiibo. Rasuulkuna (Naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi maruu maray Guryahoodii: Ha galina guryihii Kuwii la caddibay idinkoo ooyi mooyee, Hadaydaan ooyinna iska ooyihisiiya Cabsi inuu idinku dhaco wixii ku Dhacay. (waa Xadiith Saxiix ah).

Tan kale Eebe wuxuu u abuuray Cirka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya Xigmad, Caddaalad iyo tusid Qudrada Eebe iyo ku waano Qaadasho, illeen Saacaddii Qiyaamaa imane, Waana samir iyo Dhaafid la isticmaalo Waxaan diinta u dhib ahayn, Eebana waa Abuuraha wax walba Og.

Saas darteed waa in wanaagga lagu Dadaalo Xumaanta, macaasida, Beeninta Xaqa iyo Dhibka islaamkana laga fogaado. Al-Xijr (78-86).

87. waxaan ku siinay Todobo soo noqnoqota «faataxada» iyo Quraanka wayn.

وَلَقَدْ آتَيْنَاكَ سَبْعًا مِّنَ الْمَثَانِي وَالْقُرْآنَ الْعَظِيمَ ﴿٨٧﴾

88. ee ha u taagin indhahaaga waxaan ugu raaxaynay qaybo ka mida. hana u murugoon una raarici (Jilci) garabkaaga (macaamiladooda) Mu'miniinta.

لَا تَمُدَّنَّ عَيْنَيْكَ إِلَىٰ مَا مَتَّعْتَابِهِمْ أَوْ رُجِمَتْ مِنْهُمُ إِلَّا خَجْرًا غَدِرًا وَلَا يَخْرُجُ عَلَيْهِمْ وَأَخْفِضْ جَنَاحَكَ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٨﴾

89. waxaadna dhahdaa anugu waxaan uun ahay u dige cad.

وَقُلْ إِنِّي أَنَا النَّذِيرُ الْمُبِينُ ﴿٨٩﴾

90. Sidaan ugu soo dejinay Cadaab kuwii isu dhaarsaday (Dhibka xaqa).

كَمَا أَنْزَلْنَا عَلَى الْمُقْتَسِمِينَ ﴿٩٠﴾

91. ee kayeelay Quraanka Qaybo.

الَّذِينَ جَعَلُوا الْقُرْآنَ عِضِينَ ﴿٩١﴾

92. Eebaha baan ku dhaartaye waan warsanaynaa dhammaantood.

فَوَرَبِّكَ لَنَسْفَعْنَهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٩٢﴾

93. waxay falayeen.

عَمَّا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٩٣﴾

94. ee Muuji waxa lagu fari iskagana jeedso Mushrikiinta.

فَأَصْحَابُ مِمَّا قَوْمُوا وَعَرِضَ عَنِ الْمَشْرِكِينَ ﴿٩٤﴾

95. anagaa kaa kaafiyeyna kuwa jees-jeesa.

إِنَّا كَفَيْنَاكَ الْمُسْتَهْزِئِينَ ﴿٩٥﴾

96. ee yeela Eebe Miciisa Ilaah kale wayna ogaan doonaan (waxa ku dhaca).

الَّذِينَ يَجْعَلُونَ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ فَسَوْفَ يُعَامُونَ ﴿١٦﴾

97. waxaana ognahay Laabtaadu inay ka cidhiidhyami waxay sheegi (oo xun).

وَلَقَدْ نَعْلَمُ أَنَّكَ يَضِيقُ صَدْرَكَ بِمَا يَقُولُونَ ﴿١٧﴾

98. ee ku Tasbiixso mahadda Eebahaa ahawna kuwa Sujuuda.

فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَكُن مِّنَ السَّاجِدِينَ ﴿١٨﴾

99. caabudna Eebahaa intay Yaqiintu kaaga timaaddo (Geeridu).

وَأَعْبُدْ رَبَّكَ حَتَّىٰ يَأْتِيَكَ الْيَقِينُ ﴿١٩﴾

Eebe wuxuu siiyey Nabiga Faataxada iyo Quraanka wayn, wuxuuna faray inayna khaldin adduunyo, una murgin gaalada, si fiicanna kula noolaado Mu'miniita illeen waa dige cade, uguna digo wixii ku dhacay kuwii xaqa dhibkiisa isu dhaarsaday oo kala qaybiyey Quraanka, Eebana wuxuu faray Nabiga (Naxariis iyo Nabagalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu xaqa muujiyo oo la jahro qarisma dhaamaado, illeen Eebaa kaga filan kuwa jees jeecee, wuuna kaga fillaaday oo ciqaabay, illeen Quraankay kala qaybiyeene, oo Ilaah kale yeeshene, wayna ogaan ciqaabta ku dhacda, iyo inayna Laabtiisu la cidhiidhyamin xaq beeninta iyo xumaantay sheegi, iyo inuu daa'imo oo badiyo tasbiixda, mahadda iyo cibaadada Eebe inta yaqiintu oo Geerida ah uga timaaddo, taasina waxay ku tusin in cibaadada Eebe waajib tahay inta ruux noolyahay, Ibnu kathiir wuxuu yidhi: Waxayse sheegeen diin laawayaashu oo ah in yaqiinta loola jeedo Darajo Aqoonced oo marka la gaadho cibaadadu ka dhici ruuxa waa Gaalnimo, baadi iyo jaahilnimo, illeen Nabiyadii iyo asaxaabahood baa Eebe u yaqiinay uguna cilmi badnaa waxayna ahaayeen kuwa ugu cabsi iyo cibaado Eebe badan daacada way daa'imeen intay geeridu uga timid*. xaqana waa saas, suuradduna waxay ku dhamaatay in Quraanku wayn yahay, in dadka loo digo, in xaqa la muujiyo, in Eebe xaqa u gargaari, in Eebe kaliya la caabudo, in la adkaysto Eebana la caabudo inta laga Geeriyoodo. Al-Xijr (87-99).

* Saas waxaa qaba suufiyadii hore ee cilmada ku gaalimo xukumeen sida xallaaj iyo kuwa maanta qaarkood sida rabbiicyada ama timaweeynta saldhiggeedu yahay nugaal. (dib u cegaha).



Suurat An-Naxl

سُورَةُ النَّحْلِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

1. waxaa yimid amarkii Eebe Qiyaami-hii (iyo ciqaab) ee ha dedejisana, waxaa ka nasahan oo sarreeya Eebe waxay la wadaajin.

2. wuxuu ku soo dejiyaa Malaa'igta waxyi oo amarkiisa ka mida cidduu doono oo addoomadiisa ka mida oo ah ugu diga inaan ani mooyee ku kaloo xaq lagu caabuda jirin ee ani uun iga dhawrsada.

3. wuxuu u abuuray Eebe Samooyinka iyo Dhulka xaq, wuuna ka sarreeyaa waxay la wadaajin.

4. wuxuu ka abuuray dadka dhibic markaasuu noqdaa dood badane cad.

5. xoolahana wuu idiin abuuray dhexdoodana waxaa ah duggaal iyo nacfi xageedaadna ka cuntaan.

6. qurubaana idiinku sugan dhexdooda markaad dheelmaysaan iyo markaad foofinaysaan.

7. waxaadna ugu rarataan culaysyo xagga magaalo oydaan gaadhayn naf dhibkeed mooyee Eebihinna waa u ture Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

أَنزَلْنَا إِلَهُكَ فَلَا تَسْتَعْجِلْهُ سُبْحَانَهُ وَتَعَالَى عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿١﴾

يُنزِلُ الْمَلَائِكَةَ بِالرُّوحِ مِنْ أَمْرِهِ عَلَى مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ أَنْ أَنْذِرُوا أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا أَنَا فَاتَّقُونِ ﴿٢﴾

خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ تَعَالَى عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٣﴾

خَلَقَ الْإِنْسَانَ مِنْ نُطْفَةٍ فَإِذَا هُوَ خَصِيمٌ مُبِينٌ ﴿٤﴾

وَالْأَنْعَمَ خَلَقَهَا لَكُمْ فِيهَا دِفْءٌ وَمَنْفَعٌ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ ﴿٥﴾

وَلَكُمْ فِيهَا جَمَالٌ حِينَ تُرْجَعُونَ وَحِينَ تَسْرَحُونَ ﴿٦﴾

وَتَحْمِلُ أُنْفُسَكُمْ إِلَىٰ أَمَاكِنَ تَرْضَوْنَ لَكُمْ لَئِنْ تَكُونُوا تِلْغِيهِ إِلَّا بِشِقِّ الْأَنْفُسِ إِنَّ رَبَّكُمْ لَرؤُوفٌ رَحِيمٌ ﴿٧﴾

Qiyaamada iyo Maalinta aakhiro waa xaq imaan, saas darteed yuu Eebe uga cabbiray wax dhacay illeen waa hubaal, markay Muslimiintii aad u cabsadeenna waxaa soo degay inayna dedejisaniin, Eebana la wadaajis cibaado waa ka nasahan yahay kana sarreeyaa, waxyiigana wuxuu Malaa'igta ugu soo dhiibaa cidduu doono oo Nabiyada ka mida, si ay ugu diga inaan ani mooyee ku kaloo xaq lagu caabudaa jirin, kana dhawrsadaan, Cirka iyo Dhulkana wuxuu u abuuray xaq, xumaanna wuu ka sarreeyaa, dadka wuxuu ka abuuray dhibic markaasay murmaan oo isla waynaadaan, xoolaha Eebaa dadka u

abuuray isagoo duggaal iyo Naafi iyo cunno ugu sugan yahay, iyo qurux markay dheelman iyo markay foofi, kuna rartaan culays ay la aadaan meel ayna gaadheen dhib mooyee, taasina waa naxariista Eebe, saas darteed waa in Eebe si dhaba loo caabudo, laguna mahdiyo Nicmooyinkiisa, lagana digtoonaado kibirka isla waynida, muran xaq darro iyo madax adayga, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu candhuuf ku tufay Gacantiisa wuxuuna yidhi: Eebe wuxuu dhahaa Bani Aadamow sideed ii daalin anoo kaa abuurray waxanoo kale, markaad ekaatay ood waynaatay ood ku socotay dharkaaga iyo dhulka, ood kulmisay xoolo reebtayna, markay naftu dhuunta gaadhana aad dhahdid haddaan sadayqysan ma haddaa waqti sadaqa ah. waxaa wariyey Imaam Axmed iyo Ibnu Maajah. An-Naxl (1-7).

8. Fardaha iyo Baqlaha iyo Dameeraha wuxuu (idiin ku abuurray Eebe) Inaad kortaan iyo Qurux, Wuxuuna abuuri Waxaydaan Ogayn.

وَالْحَيْلِ وَالْبِغَالِ وَالْحَمِيرِ لَتَكْسِبُنَّهَا وَرِيثَةً
وَيَخْلُقُ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٨﴾

9. Xagga Eebaana jid toosan yahay (Hanuun), Mid leexsanna waa jiraa (xumaanta) Hadduu Doonana wuu idin hanuunin lahaa dhammaan.

وَعَلَى اللَّهِ قَصْدُ السَّبِيلِ وَمِنْهَا جَائِرٌ وَلَوْ شَاءَ
لَهَدَىٰكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٩﴾

10. Eebe waa kan idinka soo dejiyay Samada Biyo xaggiisaa laga cabaa Xaggiisaana Geeduhu ka ahaadaan aad Daajisaan (xoolaha).

هُوَ الَّذِي أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً لَكُمْ مِنْهُ
شَرَابٌ وَمِنْهُ شَجَرٌ فِيهِ تُسِيمُونَ ﴿١٠﴾

11. Wuxuuna idiinku soo Bixiyaa Beero Saytuun, Timir, Cinab iyo Wax kastoo midha ah, arrintaasna Calaamadbaa ugu sugan Ciddii fikiri.

يُنِثُ لَكُمْ بِهِ الْأَرْزَاقَ وَالزَّيْتُونَ وَالنَّخِيلَ
وَالأَعْنَابَ وَمِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ إِنَّ فِي ذَلِكَ
لَآيَةً لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿١١﴾

12. Wuxuuna idiin sakhiray Habeenka, Maalinta, qorraxda, Dayaxa, Xiddigahana waxaa lagu sakhiray Amarkiisa, Arrintaasna Calaamooyin yaa Ugu sugan Ciddii wax kasi.

وَسَخَّرَ لَكُمُ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ وَالشَّمْسَ
وَالْقَمَرَ وَالنُّجُومَ مُسَخَّرَاتٍ بِأَمْرِهِ إِنَّ فِي
ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿١٢﴾

13. Iyo wuxuu idiinku abuurray Dhulka oo kala Duwan yahay Midabkeedu, Arrintaasna Calaamad Yaa ugu sugan ciddii wax xasuusan (fikiri).

وَمَا ذَرَأَ لَكُمْ فِي الْأَرْضِ مُخْتَلِفًا أَلْوَانُهُ
إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِّقَوْمٍ يَذَّكَّرُونَ ﴿١٣﴾

Eebe wuxuu ku mannaysan Nimcooyin badan oon la koobi karin halkanna waxaa Lagu sheegay Fardaha, Baqlaha iyo Dameeraha oo Eebe u abuurray in lagu intifaaco iyo in Lagu xarragoodo, Wuxuuna Eebe sheegay inuu abuuri Waxayna ogayn, Tassina waa Mucjisada Quraanka oo Eebe had iyo jeer wuxuu ahaysiiyaa waxaan Jiri jirin, Xagga Eebaana Jidtoosan oo xaq yahay, Kuwa ka lexday Eebana waa Jiraan, Haduu doonana wuu hanuunin lahaa dhammaan, Waxaa kale oo Nicmooyinka Eebe ka mida Roobka wax laga cabo, lana daaqsado Doogisa, Kuna soo Bixiyo Beero kala duwan iyo

Midho nooc kasta leh, waana arrin ciddii fikiri Ay kuwaano qaadato, waxaa kale oo ka mida Nimcooyinka Eebe ee u baahan in Laga faa'iidaysto Habeenka, Maalinta, Qorraxda, Dayaxa iyo xiddigaha, oo algu Sakhiray amarka Eebe iyo Nicmooyinka kale ee kala duwan ee Eebe ku Abuuray Dhulka dadka dartiis, waana wax ay ku waano qaataan kuwa Caqliga leh iyo Xusuusta. Wanaagna falaan xumaanna ka tagaan, Eebana si dhaba u mahadiyaan Una caabudaan. An-Naxl (8-13).

14. Eebe waa kan idiin sakhiray Badda inaad Ka cuntaan Hilib cusub kalana baxdaan Qurux (Macdan) ood xidha-taan, Waxaadna aragtaan doonida (Markabka) oo Dillaacin (Dabbaalan) Dhexdeeda iyo inaad Doontaan fadliga Eebe iyo Inaad ku shugridaan.

وَهُوَ الَّذِي سَخَّرَ الْبَحْرَ لِيَتَّكَفُوا مِنْهُ لِيَحْمَأَ طَرِيقًا وَتَسْتَجِرَّ مِنْهُ جُلُودُ الْبَطْشِ وَتَرَى الْفُلْكَ مَوَاحِرَ فِيهِ وَلِيَسْتَعْمُوا مِنْ فَضْلِهِ
وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٤﴾

15. Wuxuuna ku riday (sugay) Dhulka buuro inayna Idinla iilan (wuxuuna yeelay) wabiyo iyo Wadooyin inaad ku toostaan.

وَالْقَلْبَ فِي الْأَرْضِ رَوَيْتَ أَنْ يَسْتَعْمِدَ بِكُمْ وَأَنْهَرَ وَسُبُلًا لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٥﴾

16. Iyo calaamado iyo Xiddigo ay dadku ku toosaan.

وَعَلَّمْتَهُمْ بِالنَّجْمِ هُمْ يَهْتَدُونَ ﴿١٦﴾

17. Cid wax abuuri Ma la midbaa mid aan wax Abuurayn miyaydaan wax xasuusanayn.

أَفَمَنْ يَخْلُقُ كَمَنْ لَا يَخْلُقُ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿١٧﴾

18. Haddaad tirisaan Nicmada Eebe ma koobi Kartaan, Eebana waa dambi dhaafe Naxariista.

إِنْ تَسْأَلُوا عَمَّا يُعْذَرُ اللَّهُ لَا تَخْصُمُوهَا إِنَّ اللَّهَ لَعَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٨﴾

Nimcooyinka Eebe ugu nicmeeyey Dadka waxaa ka mida Badda hirka wayn ee haddana Eebe u sakhiray dadka inay hilib cusub ka cunaan kalana soo baxaan Jawhar iyo macaadin kala duwan oo xarrago iyo wax tar leh. Maraakiibtu iyo Doonyuhuna dhex mushaaxi si dadku u doonaan fadliga Eebe iyo Rizqigiisa kuna mahdiyaan, waana wax Eebe lagu mahdiyo in Markab culays weyn ey Biyuhu xambaaraan, waxaa kale oo Nicmooyinka ka mida Dhulka Eebe noo goglay Buurana ku sugay inayan iilan, Wabiyaal iyo Waddooyin lagu tooso oo laga socdaalana yeelay, Calaamooyinna yeelay iyo Xiddigo lagu tooso. Markuu Eebe xusay wax badan oo Nicmooyinka ah yuu ku baraarujiyey awooddiisa oo in isaga uun la caabudo ay waajib tahay illeen isagaa wax abuurta, waxa ka soo hadhayna wax ma abuuraa, waauna inay saas ogaato ciddii wax xusuusan, Nicmada Eebe haddii la tiriyana lama koobi karo waxaase loo baahanyahay Eebe ku mahdin iyo Aqoonsi, Saciid iyo Xasan Basri waxay dheheen markuu Eebe abuuray dhulka Yuu gilgishay, markaasay Malaa'igtii tidhi meel lagu sugnaan ma aha markaasaa waagu baryey iyadoo Buur leh. An-Naxl (14-18).

19. Eebe waa ogyahay waxaad qarsa-naysaan iyo waxaad Muujinaysaan.

وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا تُسْرُوتُ وَمَا تُعْلِنُونَ ﴿١٩﴾

20. waxay Caabudayaan oo Eebe ka

وَالَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ لَا يَخْلُقُونَ شَيْئًا

soo hadhayna ma abuuraa waxba iyagaase la abuuraa.

وَهُمْ يُخْلَقُونَ ﴿١٠﴾

21. waana Mayd aan Noolayn mana oga waqtiga la soo bixin (Dadka).

أَمْوَاتٌ غَيْرَ أَحْيَاءٍ وَمَا يَشْعُرُونَ أَيَّانَ يُبْعَثُونَ ﴿١١﴾

22. Ilaahiinnu waa Ilaah kaliya, kuwa aan rumeynin Aakhirana Quluubtoodu way diidi (Kalinimada Eebe), wayna iskibrin.

إِلَهُكُمْ إِلَهٌ وَاحِدٌ فَالَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ فُلُوقُهُمْ مُتَكَبِّرَةٌ وَهُمْ مُسْتَكْبِرُونَ ﴿١٢﴾

23. waxaa sugan in Eebe ogyahay waxay qarsan iyo waxay Muujin Eebana ma jecla kuwa iskibriya.

لَا جِرْمَانَ أَنَّهُ يَعْلَمُ مَا يُبْسِرُونَ وَمَا يَعْلَمُونَ إِلَهَهُ وَلَا يُحِبُّ الْمُسْتَكْبِرِينَ ﴿١٣﴾

24. marka lagu dhoho muxuu soo dejiyey Eebihin waxay dhahaan waa warkii kuwii hore.

وَأَذَانٌ لَّهُمْ مَاذَا أَنْزَلَ رَبُّكُمْ قَالُوا أَسْتَطِيعُ الْأَوَّلِينَ ﴿١٤﴾

25. inay xambaaraan culayskooda «dambigooda» oo dhan Maalinta Qiyaame, iyo culayska «dambiga» kuway dhumiyeen cilmi la'aan waxaana xun waxay xambaaranayaan.

لِيَحْمِلُوا أَوْزَارَهُمْ كَامِلَةً يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَمِنْ أَوْزَارِ الَّذِينَ يُضِلُّوهُمْ بَغَيْرِ عِلْمٍ وَلَا آسَاءَ مَا يَشْرُونَ ﴿١٥﴾

Eebe waxba kama qarsoona ama ha la qarsado ama ha la muujiyee, wax ka soo hadhay oo nooc Cibaado, mutana ma jiro ama ha la Caabudo, ha la baryo. kaalmo ha la warsado, xukunkiisa ha la raaco, illeen Eebaa wax abuuraa waxa ka soo hadhayna wax ma abuuraa, waana mayd aan noolayn ogayna marka qiyaamadu kici, Ilaahayna waa kali, Gaalase Ilaah kali ah ma rabto ee waxay rabaan in waxyaalo kale lala caabudo, maxay isla kibrin mar hadduu Eebe wax walba ogyahay, kuwa iskibriyana uusan jeclayn, oo marka Quraanka la warsado dhaha waa warkii kuwii hore si ay u xambaaraan dambigoodii oo dhan iyo kii dadkay cilmi la'aan dhumiyeen, wax la xambaarana dambi baa u xun. xadiithna waxaa ku sugnaaday: in ciddii hanuun u yeedhanan heli ajirkeeda iyo Ajirka inta raacda iyagoon laga Nusqaamin Ajir, tii baadi u yeedhana waxay xambaari dambigeeda iyo dambiga inta raacday iyadoon iyana laga Nusqaaminayn. Taasina waxay ka digi inaan Dadka xumaanna la farin laguna raacin ee samo la faro laguna raaco. An-Naxl (19-25).

26. waxaa wax dhagray kuwii ka horreyey markaasuu Eebe (amarkiisii) uga yimid xagga Asaaska (Tiirarka) waxaana kaga dumay saanqaafkii korkooda wuxuuna uga yimid cadaab meelayan ogaayn.

فَدَمَعَتْ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَأَنَّى اللَّهُ بُدِّعَهُمُ مِنَ الْقُرْآنِ فَحَرَّ عَلَيْهِمُ السَّقْفُ مِنْ قَوْنِهِمْ وَأَنَّهُمْ الْعَذَابُ مِنْ حَيْثُ لَا يَشْعُرُونَ ﴿١٦﴾

27. ka dibna maalinta Qiyaame wuu dullayn wuxuuna dhihi aaway shurakadaydii aad ku doodayseen dhexdeeda, kuwiina waxay dheheen cilmiga la siiyey

ثُمَّ يَوْمَ الْقِيَامَةِ يُخْزِبُهُمْ وَيَقُولُ إِنَّا شُرَكَائِي الَّذِينَ كَفَرُوا فَسَقُوا لِيهِمْ قَالَ الَّذِينَ أُوتُوا

(Culimadii) dulli iyo xumaan maanta wuxuu saaranyahay Gaalada. ﴿٧﴾

28. ee ah kuway oofsan Malaa'igtu iyagoo dulmiyey naftooda, waxayna Muujiyaan hogaansi iyagoo dhihi maana ahayn kuwo xumaan fala, saas ma aha ee Eebe waa ogyahay waxaad falayseen.

الَّذِينَ تَتَوَفَّوهُمْ الْمَلَائِكَةُ وَالْمَلِئِكَةُ ظَالِمِي أَنْفُسِهِمْ فَأَلْقَوْا
السَّعِيرَ مَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ مِنْ سُوءِ بَيْتٍ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ
بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٨﴾

29. ee ka gala irridaha Jahannamo idinkoo ku waari dhexdeeda waxaana xumaan badan Hooyga kuwa iskibriya.

فَادْخُلُوا أَبْوَابَ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا فَلَيْسَ
مَثْوًى الْمَتَكِرِينَ ﴿٩﴾

Eebe wuxuu ka warramay inay kuwo hore oo gaalo ahaa dhagar faleen markaas Eebe ku dumiyey guryihii, Ciqaabna uga timid meelayna ka filayn, Qiyaamadana ay la kulmi dulli iyo Khasaare, waxna u tarayn waxay caabudayeen, oy ku qirina dadka culimada ah in uu dulli iyo xummani haleei gaalada, oy Malaa'igtu nafta ka qaadi iyagoo dulmiyey naftooda isna dhiibay inkirayna inay horay xumaan u faleen Eebase waa ogyahay waxay faleen waxaana lagu abaal marin Naar ay ku waaraan oo ah Hooyga u xun ee loo darbay kuwa iskibriya, taasina waxay muujin in dhagartu ku noqon saaxiibkeed, in dulli u dambayn kuwa dhagra Muslimiinta, inaan waxaan Eebe ahayn wax tarayn, sharafta cilmiga lagu camal falo, in dulli u dambayn kuwa xaqa iska kibriya, in daalimiintu is dhiibi aakhiro, inayan waxba u tarayn xumaan diiddo maalinta qiyaame, saas darteed waa in laga faa'iidaysto waqtiga Eebana la caabudo. An-Naxl (26-29).

30. Waxaa lagu Dhahaa kuwa dhawrsaday muxuu soo Dejiyay Eebihii Waxayna dhahaan Khayr, Kuwa Sama falay adduunyadana waxay mudan wanaag Daarta aakhiraana u Khayrroon waxaana wanaag Badan daarta muta-qinta (Kuwa dhawrsaday).

* وَقِيلَ لِلَّذِينَ اتَّقَوْا مَاذَا أَنْزَلْنَا عَلَيْكُمْ قَالَُوا خَيْرٌ
لِلَّذِينَ أَحْسَنُوا فِي هَذِهِ الدُّنْيَا حَسَنَةٌ وَالَّذِينَ
الْآخِرُونَ خَيْرٌ وَلَنْ نَعْمَ دَارُ الْمُتَّقِينَ ﴿١٠﴾

31. Waa jannada cadnin oy gali oy soconna dhexdeeda Wabiyaashii waxayna ka heli waxay doonaan, Saasuna Eebe ku abaal mariyaa kuwa dhawrsada.

جَنَّاتٍ عَدْنٍ يَدْخُلُونَهَا يُجْرَى مِنْ تَحْتِهَا
الْأَنْهَارُ لَهُمْ فِيهَا مَا يَشَاءُونَ كَذَلِكَ يَجْزِي اللَّهُ
الْمُتَّقِينَ ﴿١١﴾

32. Ee ah kuway oofsato Malaa'igtu iyagoo Fiican (Kuna dhihi) Nabadgalyo korkiina ha ahaato ee Ku gala jaanada Waxaad camal fali Jirteen Dartiis.

الَّذِينَ تَتَوَفَّوهُمْ الْمَلَائِكَةُ طَيِّبَاتٍ يَقُولُونَ سَلَامٌ
عَلَيْكُمْ ادْخُلُوا الْجَنَّةَ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٢﴾

33. Gaaladuse miyay sugi inay u timaado Malaa'igtu mooyee ama u yimaado

هَلْ يَظُنُّونَ إِلَّا أَنْ تَأْتِيَهُمُ الْمَلَائِكَةُ أَوْ تَأْتِي

Amarka Eebahaa, Saasayna Faleen kuwii ka horeeyay, Mana Dulmiyin Eebe iyagaase dulmiay Naftooda.

أَمُرَرِيكَ كَذَلِكَ فَعَلَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَمَا ظَلَمَهُمُ اللَّهُ وَلَكِنْ كَانُوا أَنْفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٣٦﴾

34. Waxaana ku dhacay Xumaantii waxay faleen, Waxaana ku dagay (Ciqaabtii) Waxay ku jees jeesi Jireen.

فَأَصَابَهُمْ سَيِّئَاتُ مَا عَمِلُوا وَحَاقَ بِهِمُ مَا كَانُوا يَسْتَهْزِئُونَ ﴿٣٧﴾

Aayadaha hore Waxay ka warrami xaalka kuwa Eebe rumeceey ee Xumaanta ka Dhawrsaday oo ah inay wanaag mudan Adduun iyo Aakhiroba, oy galina Janno Ay kuwaari, Kana heli waxay doonaan, Saasaana Eebe ku abaal mariyaa kuwa Xumaanta ka dhawrsada oo Mala'igtu nafta ka Qibloon iyagoo Wanaagsan oy Salaami uguna bishaarayn Janno Camalkoodi fiicnaa dartiis.

Gaalase waxay sugtaa waa Halaag iyo Eeboo amra Ciqaabtooda, Waana ciqaabtii Haleeshay kuwii hore, ee Naftooda Dulmiyay Illeen Eebe wax ma dulmiyee, Kuna dhacay oo koobay Ciqaabtii camalkoodii xumaa ee Xaq ku jees jees ahaa, Cidii xaqa Yasta oo iska Kibrisa isagooon waxba ahayn ee Miskiin Tabar Yar Waxse ismooda ha u adkaysto Dulliga iyo Ciqaabta Haleeli Hana ka Kabbado Khadhaadhka midhaha Beertiisa ku miirmay. An-Naxl (30-34).

35. Waxay dhahaan kuwii Eebe la wadaajiyay (Cibaadada) Haduu doono Eebe maanaan caabudneen cid ka Soo Hadhay waxba annaga iyo aabayaalkanno mana Xarrimneen isaga ka sokow waxba, Saasayna faleen Kuwii ka horeeyay ee Rasuullada ma saaran yahay Waxaan gaadhsiin cad ahayn.

وَقَالَ الَّذِينَ أَشْرَكُوا لَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا عَبَدْنَا مِنْ دُونِهِ مِنْ شَيْءٍ نَحْنُ وَلَا آبَاؤُنَا وَلَا اخْرَجْنَا مِنْ دُونِهِمْ شَيْءٌ كَذَلِكَ فَعَلَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَهَلْ عَلَى الرُّسُلِ إِلَّا الْبَلَاغُ الْمُبِينُ ﴿٣٨﴾

36. Waxaan ka bixinay Umad kasta Rasuul inay caabudaan Eebe kana dheeraadaan Dhaaquutka (Cibaadada Eebe ka sokow), Waxaana ka mida dadka Cid Eebe Hanuuniyay, Waxaana ka Mida Ciday ku sugnaatay Baadiniimo, Ee socda dhulka oo Eega siday Noqotay Cidhibtii Beeniyayaasha.

وَلَقَدْ بعثنا في كل أمة رسولا أن اعبدوا الله وأجرت نبوا الظالمون فجننهم من هدى الله ومنهم من حقت عليه الضلالة فسيروا في الأرض فانظروا كيف كان عقبة المكدئيين ﴿٣٩﴾

37. Hadaad ku Dadaashid hanuunkooda Eebe ma hanuuniyo ciduu Dhumiya mana helaan Gargaare.

إِنْ تَحْرِصْ عَلَى هُدْيَتِهِمْ فَإِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي مَنْ يُضِلُّ وَمَا لَهُمْ مِنْ نَاصِرِينَ ﴿٤٠﴾

Gaalada iyo dad badan oo jaahiliina way khaldamaan oo u xujaystaan dhumiddooda qaddarka Eebe iyagoo sheegan inuu hadduusan Eebe doonin ayna iyaga iyo Aabayaalkood xarrimeen wax bannaan, caabuddeenna wax Eebe ka soo hadhay, waana waxay fali jireen kuwii horan, Rasuulladana waxaan gaadhsiin ahayn ma saarra, waa jirtaa in Eebe maamulo adduunka laakiin cid walba wuxuu siiyey caqli oy ku kala doorato xumaanta iyo samaanta, Rasuullana wuu u soo diray Kutubna wuu u soo dejiyey cudur daarna ma jiro, waana Eebe kaliya in la caabudo lagana fogaado Cibaadada baadhilka Eebe ka soo Hadhay waxay dooni ha ahaatee, ciddii doontana Eebe wuu sii hanuuniyaa, tii xaqa diida inta loogu

yeedhana way sii dhuntaa, cid Eebe Mooyee wax hauninna ma jrito. Saas darteed mar hadduu Eebe xaqii caddeeyey, Jidkiina muuqdo, cid kastana Rasuul loo diray way dhammaatay Lug Geed ku mar iyo kanay tahay iyo wax la caabudo oo Eebe ka soo hadhay ee waa in uun xaqa la raaco loona hogaansamo Eebe. An-Naxl (35-37).

38. waxay ugu dhaarteen Eebe dhaar adag inuusan soo bixinayn Eebe cid dhimatay saas ma aha ee waa yabooh Eebe isasaaray (sugan) Dadka badidiise ma oga.

وَأَقْسَمُوا بِاللَّهِ جَهْدَ أَيْمَانِهِمْ لَا يَبْعَثُ اللَّهُ مَنْ
يَمُوتُ بَلَىٰ وَعْدًا عَلَيْهِ حَقًّا وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٨﴾

39. inuu u caddeeyo waxay isku diidan-nyihiin iyo inay ogaadaan kuwii Gaa-loobay inay ahaayeen Beenaalayaal.

إِنَّمَا قَوْلُنَا لِشَيْءٍ إِذَا أَرَدْنَا أَنْ نَعْمَلَهُ لَوْ كُنَّا فِي كُفْرٍ
كَلِمَةً كَذِبِينَ ﴿٣٩﴾

40. haddaan doono arrinna waa inaan uun ku dhahno ahow oy ahaato.

إِنَّمَا قَوْلُنَا لِشَيْءٍ إِذَا أَرَدْنَا أَنْ نَعْمَلَهُ لَوْ كُنَّا فِي كُفْرٍ ﴿٤٠﴾

41. kuwii u haajiray dar Eebe intii la dulmiyey ka dib waxaan dejinaynaa adduunka wanaag, ajirka aakhiraana ka wayn hadday wax ogyihiin.

وَالَّذِينَ هَاجَرُوا فِي اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مَا ظَلَمُوا لَنَنبِتَنَّهُمْ
فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً ۖ وَلَآجِرٌ لَّآخِرَةٌ أَكْبَرُ ۖ لَوْ كَانُوا
يَعْلَمُونَ ﴿٤١﴾

42. waana kuwa samray «adkaystay» Eebahoodna uun tala saarta.

الَّذِينَ صَبَرُوا وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٤٢﴾

Gaaladii waxay dhaar adag ku dhaarteen inaan Eebe soo bixinayn cid dhimatay Wuuse soo bixin Siduu yaboohay'mase oga dadka badankiisa Jaahiliinta ah, Illeen wax wabla Waqti iyo Mudduu leeyahaye, Inuu u cadayn waxay isku diidanaayeen ogaadaanna kuwii gaaloobay inay beenaalayaal ahaayeen oo waxay Addunka ku hayeen Gaaladu iyo xaq diidayaashu Been la Dhooqhoobay ahayd, Dhabta iyo Runtuna tahay waxa Eebe yaboohay Rasuuladuna rumeeyeen, Eebana Wuxuu damco wuxuu dhahaa ahaw wuuna ahaadaa wax ku Culusna ma jiro.

Kuwa dar Eebe u Hijrooday wuxuu Eebe u ballanqaaday inuu Wanaag siiyo Adduun iyo Aakhiraba, iyadoo Abaal marinta Aakhiro iyo Ajrigcedu ka wayn yahay kan adduun, Waxaana muta kuwa Samray oo u Adkaysta dhibka Eebahoodna Tala saarta, Wuxuuna ahaa Cumar binu Khadhaab markuu Muhaajiriinta wax Siin kii yiraahdaa: Qaado Eebe hakuu barakeeyee, Kani waa wuxuu Eebe kuu Yaboohay adduunke, Wuxuu kuu kaydiyay, Aakhiraana ka fiicane markaasuu akhriyay Aayadan. Taasina waxay ku tusin Wanaaga iyo Fadliga Hijrada Dar Eebe iyo in Eebe wanaag ku Abaal marin. An-Naxl (38-42).

43. waxaan dirray hortaa Rag aan u waxyoonaay, ee warsada kuwa cilmiga leh haddaydaan wax ogaayn.

وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ إِلَّا رِجَالًا نُوْحِي إِلَيْهِمْ
فَقَسُوا أَهْلَ الذِّكْرِ إِنْ كُنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿٤٣﴾

44. (waxaana la dirray) xujooyin iyo Kutub waxaana kugu soo dejinay Qu-raanka inaad u caddayso Dadka waxa loo soo dejiyey, inay fikiraan.

بِالْبَيِّنَاتِ وَالزُّبُرِ ۖ وَأَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الذِّكْرَ الْحَسْبَ لِلنَّاسِ
مَا نَزَّلَ إِلَيْهِمْ وَلَعَلَّهُمْ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٤٤﴾

45. ma aamin bay ka noqdeen kuwii dhagarta falay in Eebe la gooyo Dhulka, ama uga yimaaddo cadaab meelayna filayn.

أَفَأَمِنَ الَّذِينَ مَكَرُوا السَّيِّئَاتِ أَنْ يَخْسِفَ اللَّهُ بِهِمُ
الْأَرْضَ أَوْ يَأْتِيَهُمُ الْعَذَابُ مِنْ حَيْثُ
لَا يَشْعُرُونَ ﴿٤٥﴾

46. ama ku qabto Eebe gadgadoonkooda mana aha kuwa Eebe daaliya.

أَوْ يَأْخُذُهُمْ فِي تَقْلُبِهِمْ فَهَاجِمٌ بِمُعْجِزِينَ ﴿٤٦﴾

47. ama ku qabto Nusqaamin (iyo cabsi) iyagoo ku sugan, Eebihinna waa u Ture Naxariista.

أَوْ يَأْخُذُهُمْ عَلَى خَوْفٍ فَإِنَّ رَبَّكُمْ لَرؤُوفٌ رَحِيمٌ ﴿٤٧﴾

Gaaladu waxay wax badan inkireen in Rasuul Dada la diro, saas darteed yaa Eebe ku Raddiyeey Aayado badan, haddayna wax Aqoonna oo ogaynna waa inay warsadaan Dadka cilmiga leh. Eebana wuxuu soo dejiyey xujooyin iyo Kutub, Nabgia (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe wuxuu ku soo dejiyey Quraanka si uu ugu caddeeyo Dadka waxa lagu soo dejiyey iyo inay fikiraan, aaminna kama aha Gaaladu in Eebe Dhulka la gooyo ama cadaab uga yimaaddo meelayna ogayn, ama Eebe qabto iyagoo gad-gadoomi mana daaliyaan Eebe, ama Eebe ku qabto Cabsi iyo Nusqaan, Eebana waa u ture Naxariista, siduu Rasuulku yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe wax kaga samir badan dhib uu maqlay ma jiro, waxay ku sheegi Ilmo isna wuu arzaaqi oo Caafin. waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Ruuxii caqli lehse waa inuusan ku kadsoomin ee Eebe ka dhawrsada dhabna u caabudaa. An-Naxl (43-47).

48. Miyeyna Arkayn wuxuu Eebe Abuuray oo u iilan Hooskiisu Midig iyo Bidix Sujuud Eebe dartiis iyagoo u Khushuucsan.

أَوْ لَوْ يَرُونَ إِلَى مَا خَلَقَ اللَّهُ مِنْ شَيْءٍ يَتَفَتَنُونَ أَظَلُّوا لَهُ رِجْسَ
الَّذِينَ فِي السَّمَاوَاتِ سَجْدًا لِلَّهِ وَهُمْ لَا يَخْرُونَ ﴿٤٨﴾

49. Eebe waxaa u Sujuuda waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan oo dhul socoda iyo Malaa'ig iskamana wayneeyaan (Sujuuddiisa).

وَلِلَّهِ يَسْجُدُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ مِنْ
دَابَّةٍ وَالْمَلَائِكَةِ وَهُمْ لَا يُسْكَرُونَ ﴿٤٩﴾

50. Waxayna ka Cabsan Eebahooda Sarreeya waxayna falaan wax la faro.

يَخَافُونَ رَبَّهُمْ مِنْ قُرُونِهِمْ وَيَتَعَلَّمُونَ مَا يُوْمَرُونَ ﴿٥٠﴾

51. Wuxuuna Yidhi Eebe ha Yeelanina Ilaahyo Labo ah, Eebe waa uun Ilaah kaliya ee Aniga uun iga Cabsada.

﴿٥١﴾ وَقَالَ اللَّهُ لَا تَتَّخِذُوا إِلَهَيْنِ اثْنَيْنِ إِنَّمَا هُوَ إِلَهُ
وَاحِدٌ فَإِنِّي فَآرَهُبُونَ ﴿٥١﴾

52. Eebe waxaa u sugnaaday waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, waxaana u sugnaaday Diin (Cibaado) Joogta ah, ee ma Eebe cidaan ahayn yaad ka dhawrsanaysaan.

وَلَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَلَهُ الدِّينُ وَاصْبَاً أَفْعَبُ اللَّهُ
تَتَّقُونَ ﴿٥٢﴾

53. Waxa Nicma ah ood haysataan waxay ka timid Eebe, markuu idin

وَمَا يَكُرُّ مِنْ نِعْمَةٍ فَمِنَ اللَّهِ ثُمَّ إِذَا مَسَّكُمُ الضَّرُّ فَأَيُّ اللَّهِ

Taabsiiyo Dhibna Xaggiisaad u Qay-
leysaan.

﴿يَجْعَلُونَ ٥٧﴾

54. Markuu idinka Faydo Dhibkana
Koox idinka mida yaa Eebahood la
wadaajisa (Cibaadada).

ثُمَّ إِذَا كَسَفَ الضُّمُرَ عَنْكُمْ إِذَا فَرِيقٌ مِنْكُمْ يَرِيهِمْ
يُشْرِكُونَ ﴿٥٧﴾

55. Inay ka Gaaloobaan waxaan siin-
nay, Raaxaysta waad Ogaan doontaan
«Cidhibta Xaalkiinne».

يَكْفُرُوا بِمَا آتَيْنَاهُمْ فَتَمَتَّعُوا فَسَوْفَ يَتَعَمَّوْنَ ﴿٥٨﴾

Ibnu Kathiir wuxu Yidhi: Eebe wuxuu ka warrami Waynidiisa oo wax kasta u Khushuuco Dhammaan, wax Nool iyo wax kalaba iyo Insi, Jinni iyo Malaa'igba, oo xataa Hoosku Eebe u Sujuudo. Malla'igtuna Fulin Amarka Eebe, kana Cabsan, iyo inaan Ilaahay Mooyee Eebe kale oo xaq lugu caabudo jirin, isaga kaliyana muto Cibaado, illeen isagaa wax walbaba lehe, Cibaado Jooqta ahna Mudane, tankale wixii Nicma ah oo la Haysto xagga Eebay ka timid, Eebaana dhibka fayda oyna Xaq tahay in Kaliigiis la Caabudo, Gaalase waydiiday ee ha ku raaxaysteen waxa Eebe siiyey way ogaan waxa ku dhaca. Mahad Eebaa mudan, waynayna isagaa xaq u leh, isagaana lagu Hoos jiraa Aakhiro iyo Aduunba, Amarkiisuna fuli. An-Naxl (48-55).

56. Waxay u yeelaan waxayna ogayn
Qayb waxaan ku Arzaanay ka mida,
Dhaar Eebee waa laydin warsaan (Gaa-
loy) waxaad Been Abuuranaysaan.

وَيَجْعَلُونَ لِمَا لَا يَعْمَلُونَ نَصِيبًا مِمَّا رَزَقْنَاهُمْ تَاللَّهِ
لَسَعْلَىٰ عَمَّا كَفَرْتُمْ تَقْدِرُونَ ﴿٥٩﴾

57. Waxayna u yeelaan Eebe Gabdho
waa ka Nasahanyahay, iyaguna waxay
yeelan waxay rabaan.

وَيَجْعَلُونَ لِلَّهِ الْبَسِيتَ سُبْحَانَ اللَّهِ وَأَلْهَمَهُ مَا يَشْتَهُونَ ﴿٦٠﴾

58. Marka Loogu Bishaareeyo midkood
Dhaddig wuxuu Noqdaa Wajigiisu Ma-
dow walbahaarina.

وَإِذَا بُشِّرَ أَحَدُهُم بِالْأُنثَىٰ ظَلَّ وَجْهُهُ مُسْوَدًّا
وَهُوَ كَاطِمٌ ﴿٦١﴾

59. Wuxuuna iska Qariyaa Dadka
Xumida waxa loogu Bishaareeyey,
miyuu ku haystaa Dulli mise wuxuu
Dhumbiyaa Dhulka, waxaa xun waxay
Xukumi.

يَتَوَرَّىٰ مِنَ الْقَوْرِ مِنْ سُوءِ مَا بُشِّرَ بِدَاءِ أَيْمِسْكَةٍ
عَلَىٰ هُونٍ أَمْ يَدُسُّهُ فِي التُّرَابِ أَلَا سَاءَ مَا يَحْكُمُونَ ﴿٦١﴾

60. Kuwaan rumayn Aakhiro waxaa u
sugnaaday Tusaale xun, Eebana waxaa
u sugnaaday Sifada sare, waana Ad-
kaade falsan.

لَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ مَثَلُ السَّوْءِ وَلِلَّهِ الْمَثَلُ
الْأَعْلَىٰ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٦٢﴾

Waxaa ka mida Caadada Xun ee Gaalada inay xoolahooda kala qaybiyaan oo Qaarna Eebe ku sheegaan Qaarna Shurakadooda, waase la warsan Been Abuurashadooda, sidoo kale waxay Eebe ku Sheegaan Gabdho iyaguna waxay doonaan oo Wiilal ah, eebase waa ka Nasahanyahay waxay sheegi, iyadoo marka mid ka mida Loogu Bishaareey Gabadh uu Wajigiisu Door-soomo Walbahaarana, kana

qarsoomo oo ka Dhawrsado Dadka isagoo ka xun waxa loogu Bishaareeyey, kuna fikirri ma dullibuu ku hayaa mise wuu dilaa oo dhulka ku Xabaalaa, waxayna Xukumayaan wax Xun, dhabtuna waa in kuwaan Aakhirana Rumayn tusaale xun u sugnaaday, Eebana Sarrayn, Wanaag iyo Wayni u sugnaatay, yahayna mid Awood iyo falsami ku Sifoobay. Aayaduhuna waxay sugi in Cibaadada Khalqiga iyo Xukunka Dhamaan Eebe iska leeyahay, uuna u Baahnayn Ilmo iyo Kaalmo, inay Jaahiliyo tahay Gabdho la silciyo ama la Gacan Bidixeeyo, in Wanaagga oo Dhanna Eebe ku dhamaado, Xumaan, Dulli iyo Liidmana Gaalo ku dhamaado, ee dhab ha loo Caabudo Eebahaas. An-Naxl (56-60).

61. Hadduu Eebe u qaban Dadka Dulmigooda Kagama tageen korka dhulka wax socda, wuxuuse dib ugu dhigi Muddo Magacaaban, markay Ajashoodu timaadana kama dib maraan Saacad kamana hormaraan.

وَلَوْ يَرَاهُ اللَّهُ النَّاسُ بِظُلْمِهِمْ مَا تَرَكَ عَلَيْهِمْ
دَابَّةً وَلَكِنْ يُؤَخِّرُهُمْ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى فَإِذَا جَاءَهُمْ
لَا يَسْتَفْخِرُونَ سَاعَةً وَلَا يَسْتَقْدِمُونَ ﴿٦١﴾

62. Waxayna u yeelaan Eebe waxay Nacayaan, waxayna tilmaami carrabya-doodu Been inuu wanaag u sugnaaday, waxaa sugan in Naar uun u sugnaatay, oo loo hormarin (luguna dhaafi).

وَيَجْعَلُونَ لِلَّهِ مَا يَكْفُرُونَ وَتَصِفُ أَلْسِنَتُهُمُ
الْكُذِبَ أَنْ لَهُمُ الْحُسْنَىٰ لَآ جَزَاءَ لَهُمُ النَّارُ
وَأَنَّهُمْ مُّفْرَطُونَ ﴿٦٢﴾

63. Dhaar Eebee waxaan (Rasuullo) u dirray Umado kaa horreeyey wuxuuna u Qurxiyey Shaydaan camalkooda isagaana sokeeye u ah Maanta waxayna mudan Cadaab daran.

ثُمَّ لَقَدْ أَرْسَلْنَا إِلَىٰ آلِ قَارِئِنَ لَهْمُ
الشَّيْطَانُ أَعْمَانَهُمْ فَهُوَ وَوَلِيُّهُمْ الْيَوْمَ وَلَهُمْ
عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٦٣﴾

64. Quraankana waxaa uun kuugu soo Dejinay inaad u Caddaysid Dadka waxay isku Khilaafsanyihiin iyo Hanuunka iyo Naxariista Ciddii Rumayn.

وَمَا أَرْزَلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ إِلَّا الشَّيْئِينَ لَهُمُ الَّذِي
اخْتَلَفُوا فِيهِ وَهُدًى وَرَحْمَةً لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٦٤﴾

65. Eebana waa kan ka soo Dejiya Samada Biyo, kuna Nooleeya Dhulka Abaar ka dib, Arrintaasna Calaamad yaa ugu sugan Ciddii wax maqli.

وَاللَّهُ أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَحْيَاهُ الْآرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا
إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَةً لِّقَوْمٍ يَسْمَعُونَ ﴿٦٥﴾

Aayadahan waxay ka warrami Dusha Eebe iyo hadduu Dadka u qaban Dulmigooda aan Dhulka Ciduna ku Noolaateen, wuxuuse dib ugu dhiga muddo magacaaban markay Timaadana Saacad dib loogama dhaco lagamana hor maro, Gaaladuna Eebe wax xun yey ku sheegeen, Beenna waxay ku sheegi in wanaaggu iyaga u sugnaaday, waxaase dhaba in Naaru u sugnaatay loona hor marin, waana jirtaa in Eebe u diray Rasuullo Ummadahooda, Shaydaanna u Qurxiyey Camalkooda, isagaana Qiyaamada sokeeye u ah, Cadaab daranna yaa mudan, Quraankana wuxuu Eebe ugu soo Dejiyey Nabiga inuu Dadka u Caddeeyo waxay isku diidanyihiin iyo isagoo Hanuun iyo Naxariis u ah Ciddii xaq Rumayn, uguna Deeqay Dadka Roob iyo Khayr ku Nooleeya Dhulka Abaar ka dib waana waxay ku Waano Qaadato Ciddii wax maqli, Saas darteed Dusha Eebe iyo Naxariistiisa yaan lagu kadsoomin wuu Ciqaab iyo Qabasho daranyahaye. An-Naxl (61-65).

66. Waxaana idiinku sugan Xoolaha Cibrad (Waano qaadasho) waxaana idinka waraabinaa waxa ku sugan Caloosheed Digo iyo Dhiig dhexdooda ah Caano Saafi ah oo u fudud kuwa Cabbi.

وَأَنَّ لَكُمْ فِي الْأَنْعَامِ لَعِبْرَةً لَتُسْقِيَهُمْ مِمَّا فِي بَطُونِهِمْ مِنْ
بَيْنِ قَرْنَيْنِ وَمِمَّا لَبَسْنَا خِالصًا سَائِعًا لِلشَّارِبِينَ ﴿٦٦﴾

67. Iyo Midhaha Timirta iyo Cinabka ood ka yeelataan Cabbid iyo Risqi Fiican, Arrintaasna Calaamadbaa ugu sugan cidii wax kasi.

وَمِنْ ثَمَرَاتِ النَّخِيلِ وَالْأَعْنَابِ تَتَّخِذُونَ مِنْهُ سَكَرًا
وَرِزْقًا حَسَنًا إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٦٧﴾

68. Wuxuu u Waxyooday (ku Ilhaameeyey) Eebahaa Shinnida ka yeelo Buuraha Guryo iyo Geedaha iyo waxay Dhistaan.

وَأَوْحَىٰ رَبُّكَ إِلَى النَّحْلِ أَنْ اتَّخِذِي مِنَ الْجِبَالِ بُيُوتًا
وَمِنَ الشَّجَرِ وَمِمَّا يَعْرِشُونَ ﴿٦٨﴾

69. Markaas Cun Midho kasta xaggooda qaadna Jidadka Eebahaa oo laylyan, waxaana ka soo baxa Calooshooda Cabbid kala duwantahay Midabkoodu dhexdiisana waxaa ah Daawo Dadka, Arrintaasna Calaamaa ugu sugan ciddii Fikiri.

لَهُ كُلِّ مِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ فَاسْلُكِي سُبُلَ رَبِّكِ ذُلُلاً يَخْرُجُ
مِنْ بَطُونِهَا فَتَطْرَأُ مُتَخَلِّفًا أَلْوَانَهُ فِيهَا رِيشًا لِلنَّاسِ إِنَّ
فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٦٩﴾

70. Eebaa idin abuuray markaas idin oofsan (Dili) waxaana idinka mida cid loo celin (la gaadhsiin) cimriga ugu liita inuusan ogaan waxba cilmi «ogaansho» dabadiis, Eebana wax walba waa ogyahay karaana.

وَاللَّهُ خَلَقَكُمْ ثُمَّ يَتَوَفَّاكُمْ وَمَنْكُمْ مَنِ يُرَدُّ إِلَىٰ أَرْذَلِ
الْعُمُرِ لِكَيْ لَا يَعْلَمَ بَعْدَ عِلْمِهِ شَيْئًا إِنَّ اللَّهَ
عَلِيمٌ قَدِيرٌ ﴿٧٠﴾

Xoolaha Nicmoolayda ah waxaa ku sugan Calaamad ku Tusin Qudradda Eebe, sida Eebe inooga siiyo Caano Saafi ah oo ka soo Dhexbaxay Uus iyo dhiig, Macaanna oo Cunaha Cabbaha u sahlan, iyo Ciddii Dhama, sidoo kale wuxuu ina siiyey oo Midho Timireed iyo Canab aan ka yeelnaan Cunno fiican oo tusin ciddii caqli leh Awoodda Eebe iyo Naxariistiisa, sidoo kale wuxuu ku Ilhaameeyey Shinnida oo ah Duulaa yar inay Guri ka yeelato Buuraha, Geedaha iyo Dhista, oyna cunto Midho kala duwan, qaaddana Meelo iyo Jidad Eebe u Sahlay, kana soo baxo Caloosheeda Cabbid Midabkeedu kala duwanyahay, Daawana Dadka ugu sugantahay, taasina waa calaamad ku tusin awoodda Eebe ciddii fikiri, saasaadna u aragtaa sida Eebe Dadka ugu Nicmeeyey Xoolo ay Caano ka dhammaan, midho ay wax ka Cunaan, Shinni Malab u samaysa, waana xayawaankaas tabarta yar, yaa macaaneeyey dhaacaankeeda Eebe kaliya, waxaana sugnaatay in Nina u yimid Nabiga (N.N.E.K.H.) una sheegay in Walaalkiis Shubmi, kuna yidhi Malab waraabi, kuna soo noqnoqday dhawr jeer isagoo sheegi inuu wali shubmi markaa kuna yidhi Waraabi Malab Eebaa run sheegi, Caloosha Walaalkaana waa Beenaleeye, markaasuu Waraabiyey ka dibna Bogsaday. Taasina waxay ku Tusin in Eebe u sakhiray Dadka in wax Badan u Adeegaan una shaqeyaan si Eebe loogu Mahdiyo. An-Naxl (66-70).

71. Eebe wuu ka fadilay Qaarkiin qaar Risqiga, mana aha kuwa la fadilay kuwii ku celiya Risqigooda waxay gacantoodu hanato oy isku mid ku noqdaan ee Ma Nicmada Eebaad diidsaan.

وَاللّٰهُ فَضَّلَ بَعْضَكُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ فِي الرِّزْقِ فَمَا الَّذِينَ
فُضِّلُوا بِرِزْقِهِمْ عَلَىٰ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُمْ فِيهِ
سَوَاءٌ أَلْقَيْنِعْمَةً لِّلّٰهِ يَجْحَدُونَ ﴿٧١﴾

72. Eebe wuxuu idinka yeelay naftiinna azwaaaj wuxuuna idinka yeelay Haweenkiinna caruur iyo farac idinkuna arsaacaqay wanaag ma baadhilbay rumayn oy Nicmada Eebey ka Gaaloobi.

وَاللّٰهُ جَعَلَ لَكُم مِّنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لَّعَلَّكُمْ
تَرْضَوْنَ حُرْمَةَ رَبِّكُمْ وَمَا بَيْنَ الْأُطْرَافِ
أَفِي الْبَاطِلِ يُؤْمِنُونَ وَبِنِعْمَةِ اللَّهِ هُمْ
يَكْفُرُونَ ﴿٧٢﴾

73. waxayna Caabudayaan Eebe ka sokow waxaan uga hananayn Risqi Samooyinka iyo Dhulka waxba, waxna karin.

وَيَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَمْلِكُ لَهُمْ رِزْقًا مِّن
السَّمٰوٰتِ وَالْأَرْضِ شَيْئًا وَلَا يَسْتَطِيعُونَ ﴿٧٣﴾

74. ee hawyeelina Eebe wax la mida Eebe wuu ogyahay idinkuse ma ogidine.

فَلَا تَصْرُفْ يُؤَلِّهُ اللَّهُ الْآمَالَ إِنَّا اللَّهُ نَعْلَمُ وَأَنْتُمْ
لَا تَعْلَمُونَ ﴿٧٤﴾

Eebaa wax Abuura Dilana, Dadna cimriisiiya intay ka gaadhaan Gabow daran oyna waxba kala kasin, oo ah Da'duu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe ka magan galay kuna yidhi: Eebow waxaan kaa magan gali Bakhaylnimo, washi duqnimo, iyo in la ii celiyo Cimriga u xun iyo Cadaabka Qabriga iyo Fidnada dajaal iyo Fidnada nolosha iyo Tan geerida. Waxaa wariyay Bukhaari. Tan kale waxay muujin Doqonimada Gaalada oo ah inay Eebe addoomadiisa Shariig uga yeelaan, Mana eka, Sidayna iyaga iyo waxay hantaan u sinayn, Taasina waa Nicmo Eebe diid, Tan kale in Eebe isu abuuray rag iyo haween markay is guursadaana kala Siiya Caruur iyo Facac dadkana ku Arsaacaq wanaag.

Ma waxayse rumayn Baadhil iyo xumaan oy ka Gaaloobi Nicmada Eebe, oy Caabudi Eebe ka sokow waxaan Rizqi ugu Hananayn cirka iyo dhulka, Waxna karin Xaqna ma aha in Eebe loo yeelo tusaale xun oo lagu shabaho wax'oo lala simo'illeen waxbuu ogyahay, Dadkuna wax ma ogee, Eebaa xaqa, Awood leh, Xukun leh, Caddaalad leh, Wax nooleeya waxna dila Xagiisana Loo ahaan. An-Naxl (71-74).

75. Eebe wuxuu ka yeelay tusaale Addoon la leeyahay oon Waxba karin iyo Ruux aannu ku Arzaaqnay rizqi fiican oo u bixin qarsoodi iyo muuqaalba, Ma isku midbaa, Mahad Eebaa iska leh, Badankooduse wax ma oga.

* ضَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا عَبْدًا مَّمْلُوكًا لَا يَقْدِرُ عَلَىٰ
شَيْءٍ وَمِن رِّزْقِهِ مَنَارًا لَّهُوَ يُوَسِّقُ مِنْهُ
سِرًّا وَجَهْرًا هَلْ يَسْتَوِي ٱلْحَمْدُ لِلّٰهِ بَلْ
أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٧٥﴾

76. Waxaa (kale) oo Eebe tusaale ka yeelay laba Nin oo midkood Af la'ayahay (Mahadle) waxna karin dhibna ku ah (Culays) Ilaaliyihiiisa meel Kastoo ujeedyana aan wanaag ka imanaynin Ma Egyihiin isaga iyo ruux fari Cad-

وَضَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا رَّجُلَيْنِ أَحَدُهُمَا أَبْكَمُ
لَا يَقْدِرُ عَلَىٰ شَيْءٍ وَهُوَ كَلٌّ عَلَىٰ مَوْلَاهُ أَيْنَمَا يُوَجِّههُ
لَا يَأْتِ بِخَبَرٍ هَلْ يَسْتَوِي هُوَ وَمَنْ يَأْمُرُ
بِالْعَدْلِ وَهُوَ عَلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٧٦﴾

daalada Jid toosanna ku sugan.

77. Eebaa iska leh waxa ku maqan Samooyinka iyo Dhulka, Saacadda amarkeeduna ma aha ilbidhiqsigeed mooyee ama ka dhaw, Eebana wax Kasta wuu karaa.

وَاللَّهُ عَذِيبُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا
أَمْرُ السَّاعَةِ إِلَّا كَلَمْحِ الْبَصَرِ أَوْ هُوَ أَقْرَبُ
إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٧٧﴾

78. Eebe wuxu idinka soo bixiyay Caloosha Hooyooyinkiin Waxba idinkoon ogayn wuxuuna Idiin yeelay Maqal iyo Arag iyo Quluub inaad Ku Shukridaan Eebe.

وَاللَّهُ أَخْرَجَكُمْ مِنْ بُطُونِ أُمَّهَاتِكُمْ لَا تَعْلَمُونَ
شَيْئًا وَجَعَلَ لَكُمُ السَّمْعَ وَالْأَبْصَارَ وَالْأَفْئِدَةَ
لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٧٨﴾

79. Miyayna arkayn Shinbiraha loo Sakhiray Hawada samada, Waxaana Eebe ahayna haynin, taasina Calaa-mooyin yaa ugu Sugan Ciddii rumayn (Xaqa).

الَّذِينَ رَوَّأُوا إِلَى الطَّيْرِ مُسَخَّرَاتٍ فِي جَوِّ السَّمَاءِ
مَا يَمْسِكُهُنَّ إِلَّا اللَّهُ إِنْ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ
يُؤْمِنُونَ ﴿٧٩﴾

Waa tusaalayaal Eebe u yeelay Muslimka iyo Gaalka, oo ah inayna sinnayn Cid tasarrufi oo wax bixin iyo Midaan waxba karin, iyo Midaan hadlayn Culaaysna ku ah dadkuu la nool yahay Wanaagna laga sugayn iyo Mid wanaaga Fari oo jidka toosan ku socda, Tan kale Eebaa iska leh waxa ku qarsoon Cirka iyo dhulka, Dhicidda Qiyaamana waa uun ilbidhiqsi ama ka Dhaw, Illeen Eebaa wax kasta karee waana kan Dadka ka soo saaray uurka Hooyooyinka Jaahiliina oon wax Aqoon una yeelay Maqal, Arag iyo Caqli si ay Eebe ugu Aqoonsadaan uguna Mahadiyaan.

Tan kale waxaa ka mida Awooddiisa Shinbiraha ku duuli Hawada Cirka Waxaan Eebe ahayn haynin, Waxaasoo dhanna waxay Dadka ku Waajibin Eebe aqoonsi iyo Cibaadadiisa dhabta ah. An-Naxl (75-79).

80. Eebe wuxuu idinka yeelay Guryihiinna xasil (Deegaan) wuxuuna idinka yeelay harkaha xoolaha Guryo idiin fudud maalinta geediga iyo maalinta nagaadigaba, idinkana yeelay Suufkeeda iyo dhogarta (Geela) iyo dhogorta (Riyaha) Alaab iyo Maacuun tan iyo muddo.

وَاللَّهُ جَعَلَ لَكُم مِّنْ بُيُوتِكُمْ سَكَنًا وَجَعَلَ لَكُم مِّنْ
جُلُودِ الْأَنْعَامِ بُيُوتًا تَسْتَخِفُّونَهَا يَوْمَ ظَعْنِكُمْ
وَيَوْمَ إِقَامَتِكُمْ وَمِنْ أَصْوَافِهَا وَأَوْبَارِهَا وَأَشْعَارِهَا
أَتَأْتُونَ آلِهَةً مِن دُونِ اللَّهِ إِن كُمْ تُؤْمِنُونَ ﴿٨٠﴾

81. Eebe wuxuu idiinka yeelay wuxuu abuuray (Geedaha) hadh, wuxuuna idiinka yeelay Buuraha Dugaal, idiinkana yeelay dhar idinka dhawra kulaylka iyo Qamiis Bireed idinka dhawrta (Dhibka) Dagaalka, saasuuna idiinku Taamyeele Eebe Nicmadiisa inaad Islaam noqotaan (Xaqa raacdaan).

وَاللَّهُ جَعَلَ لَكُم مِمَّا خَلَقَ ظِلَالًا وَجَعَلَ لَكُم مِّنَ
الْجِبَالِ الْكُنُوزَ وَجَعَلَ لَكُم مِّنَ سُرُبِيلٍ
تَقْيِيكُمُ الْخَرُوفِ وَسُرُبِيلٍ تَقْيِيكُمُ النَّاسِكُمْ
كَذَلِكَ يَمُنُّ عَلَيْكُمْ لَعَلَّكُمْ
تَسْلِمُونَ ﴿٨١﴾

82. hadday jeedsadaan waxaa uun korkaaga ah gaadhsiin cad.

فَإِنْ تَوَلَّوْا فَإِنَّمَا عَلَيْكَ الْبَلْعُ الْمَمِينُ ﴿٨٢﴾

83. way garan Nicmada Eebe wayna dafiri, badankooduna waa Gaalo.

يَعْرِفُونَ نِعْمَتَ اللَّهِ ثُمَّ يُنْكِرُونَهَا
وَكَتَرُوهُمُ الْكٰفِرُونَ ﴿٨٣﴾

Eebe wuxuu Aayadahan ku sheegi Nicmooyinkiisa Qaarkood, sida Guryaha, harkaha xoolaha, dhogorta xoolaha, Geedaha la hadhsado, Buuraha la dugsado, dharka Kulaylka iyo Qabowga ka dhawra, labiska deegaalka, waxaa soo dhanna wuxuu Eebe u siiyey inay Muslim ahaadaan, oo xaqa ku toosnaadaan, ciddiise ka gaalowda oo xaqa ka jeedsata iyada umbaa iska dhuntay ee Rasuulka waxaa uun laga rabaa xaq gaadhsiin, haddana iyagoo og Nicmada Eebe yey dafirayaan oo diidi. Ibnuu Abii Xaatim waxaa laga wariyey in Nin reere Miyiga carbeeda Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u yimid warsadayna Nabiga Markaas ku akhriyey Aayaadkan isagoo leh haa mid walba, markaas jeedsaday. markaasay soo degtay Aayada kale, waase aayad guud ahaan loola jeedo, ayna waajib tahay in Nicmada Eebe la aqoonsado laguna mahdiyo. An-Naxl (80-83).

84. (Xusuusi) maalintaan ka soo bixin Umad kasta marag, markaasna aan loo Idmayn kuwii Gaalobay cudar daarasho, Lagana doonayn cudur daar.

وَيَوْمَ نَبْعَثُ مِنْ كُلِّ أُمَّةٍ شَهِيدًا ثُمَّ لَا يُؤْذَنُ
لِلَّذِينَ كَفَرُوا وَأَلَّهُمْ يَسْتَعْتَبُونَ ﴿٨٤﴾

85. Markay arkaan kuwii Dulmi falay Cadaabka Lagama fududeeyo xaggooda lamana sugo.

وَإِذْ أَرَأَى الَّذِينَ ظَلَمُوا الْعَذَابَ فَلَا يُخَفِّفُ عَنْهُمْ
وَلَآ هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٨٥﴾

86. Markay arkaan kuwii Gaaloobay shurakadooda waxay dhahaan Eebow kuwaasu waa Shurakadannadii aannu Caabudi jirray Eebe ka sokow, Markaasay ku soo tuureen Hadal ah idinku Been baad sheegaysaan.

وَإِذْ أَرَأَى الَّذِينَ أَشْرَكُوا شُرَكَآءَهُمْ قَالُوا رَبَّنَا
هَؤُلَاءِ شُرَكَآؤُنَا الَّذِينَ كُنَّا نَدْعُو مِنْ دُونِكَ
فَأَلْقُوا إِلَيْهِمُ الْقَوْلَ إِنَّا كَلِمَاتٌ كٰذِبَةٌ ﴿٨٦﴾

87. Waxayna u Dhiibaan Eebe Maalintaa Hogaansiga, waxaana ka dhuma waxay Been Abuuran jireen.

وَأَلْقُوا إِلَى اللَّهِ يَوْمَئِذٍ السَّلْمَ وَوَضَّلُ عَنْهُمْ
مَآكِلَهُمْ لِيَفْتَرُوا ﴿٨٧﴾

88. Kuwii gaalobay ee ka awday dadka jidka Eebe waxaan ugu siyaadinnaa Cadaab Korka cadaabka Faa-suqnimadooda Darteed.

الَّذِينَ كَفَرُوا وَوَصَدُوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ زَيْنَهُمْ
عَذَابًا تَوْفِيقًا لِلَّذِينَ يَمَآكِلُهُمْ لِيَفْسُدُونَ ﴿٨٨﴾

Aayadahanna waxay ka warrami Xaalka gaalada maalinta Qiyaame iyo Nabigii umad walba Marag looga dhigi, Wax cudur daarana aan laga Aqbalaynin lana warsanayn, Cadaabkana laga fududaynayn, oyna Gaaladii iyo waxay Caabudayeen oo Eebe ka soo Hadhay murmi isna Beenin, Gaalana maalinta Hoggaan Eebe u dhiibi, Mase aha Waqti hogaan Dhiibid ee waa uun Ama janno wanaag ku dhan yahay (Eebaan ka baryaynaaye) ama naar dulli ku dhan yahay (Eebaan ka Magan galaynaaye) wixii la caabudaayay ee Eebe ka soo hadhayna wuxuu noqday been la Dhoobdhoobay iyo Wax kama jiraan kuwii Gaaloobay ee dadkana Xaqa ka leexiyay waxay mudan Cadaab mid kale lagu kordhiyo Faasiqnimadooda darteed, Saasayna dhabtu u muuqan oo loo kala bixi, loona kala miirmi. An-Naxl (84-88).

89. (Xusuusi) Maalintaan ka soo bixi-nayno Umad kasta marag Naftooda ah oon ku Keenayno (Nabiyow) Adoo marag ku ah kuwan (Umadaada) Waxaana kugu dajinnay Kitaab oo ah Caddaynta wax kasta iyo hanuun iyo Naxariis iyo bishaarada dadka muslimiinta ah.

وَيَوْمَ نَبْعَثُ فِي كُلِّ أُمَّةٍ شَهِيدًا عَلَيْهِمْ مِّنْ أَنْفُسِهِمْ وَجِئْنَا بِكَ شَهِيدًا عَلَىٰ هَٰؤُلَاءِ وَنَزَّلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ تِبْيَانًا لِّكُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً وَبُشْرَىٰ لِلْمُسْلِمِينَ ﴿٨٩﴾

90. Eebe wuxuu Fari Caddaalad iyo Samafal iyo Wax siinta qaraabada Wuxuuna reebi Xumaan iyo Munkar iyo Gardarro, Wuuna idin Waanin inaad wax Xasuusataan.

*إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَايَ ذِي الْقُرْبَىٰ وَيَنْهَىٰ عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ وَالْبَغْيِ يُعْظِمُ لَكُمْ أَلْمَامَ تَذَكَّرُونَ ﴿٩٠﴾

91. Oofiya Ballanka Eebe markaad Ballantantaan hana burinina Dhaarta ka dib intaad adkayseen ood uga yeesheen Eebe korkiina Kafiil (ilaaliye), Eebana waa ogyahay Waxaad falay-saan.

وَأَوْفُوا بِعَهْدِ اللَّهِ إِذَا عَاهَدْتُمْ وَلَا تَنْقُضُوا الْأَيْمَانَ بَعْدَ تَوْكِيدِهَا وَقَدْ جَعَلْتُمُ اللَّهَ عَلَيْكُمْ كَفِيلًا إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا تَعْمَلُونَ ﴿٩١﴾

92. Hana Noqonina Sidii tii Burisay (furfurtay) Soohiddii Xoog ka dib furfurid idinkoo ka yeelan dhaartiina Dhagar dhexdiina ah, inay ahaatay ummad mid ka badan Ummad kale, Eebe wuu idinku imtixaani (Amarkaas) iyo inuu idiin Cadeeyo maalinta Qiyaame waxaad isku diidanaydeen.

وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِي نَفَقَتْ عَنْهَا مِنْ بَعْدِ قُوَّةٍ أَنْتُمْ تَتَّخِذُونَ أَيْمَانَكُمْ دَخَلًا بَيْنَكُمْ أَنْ تَكُونَ أُمَّةٌ هِيَ أَرْبَىٰ مِنْ أُمَّةٍ إِنَّمَا يُلْوِكُمُ اللَّهُ بِهِ وَيَلَيْسَ لَكُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ مَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِمُونَ ﴿٩٢﴾

Maalinta qiyaame cid walba Maragbaa loo keeni, Ummadana waxaa marag U noqon Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Quraan wax kasta cadeeyayna waa lagu soo Dajjiyay oo hanuun, Naxariis iyo Bishaaro u ah Muslimiinta. Ibnu Maseuud wuxuu yidhi: Quraanka Waxaa naloogu Cadeeyay Cilmiga wax kasta. Aayadda kale Eebe Wuxuu ku Faray Caddaalad. Sama fal. Qaraabadoo la xidhiidhiyo, Wuxuuna ku reebay Xumaanta, Munkarka iyo Gardarrada, waano si loo xusuusto wax.

Xadiith waxaa ku sugnaaday: dambi in Eebe ugu soodejejiyo Ciqaabta addunka iyo yadoo tii aakhiro dhimantahay ka mudan gardarro iyo qaraabo goys ma jiro. Ibnu Maseuudna wuxuu yidhi: Aayadda u kulmin badan ee quraanka waatan. Eebana wuxuu jecelyahay umuuraha sare ee sharafta leh, wuxuuna naca waxyaalaha hoose ee xun sida xadiith ku sugnaatay, Ballanka iyo dhaartana waa in la oofiya inta la adkeeyey ka dib, lana burinin oon la noqonin sidii haweeneydii soohday xadhiga iyo dunta markaas furfurtay, lagana yeelanin dhaarta dhagar isagoo laga faa'iidayan in ummaddii ka badatay umad kale Eebana dadka wuu Imtixaani inuu u caddeeyo Qiyaamada waxay isku khilaafsanayeen kalana xukumo. An-Naxl (89-92).

93. hadduu doono Eebe wuxuu idinka وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَٰكِنْ يُضِلُّ

yeeli lahaa umad kaliya wuxuuse dhu-miyaa cidduu doono, wuuna hanuuniyaa cidduu doono, waana laydin warsan waxaad camal falayseen.

مَنْ يَشَاءْ وَيَهْدِي مَنْ يَشَاءْ وَلَسْتَ لَنْ عَمَّا كُنْتُمْ
تَعْمَلُونَ ﴿٣٧﴾

94. haka yeelanina dhaartiinna dhagar dhexdiinna ah ood markaas simbiriiri-xataa gomadi intay sugnayd ka dib ood dhadhamisaan xumaan (Cadaab) ka jeedintiinna dadka jidka Eebe darteed, waxaana idiin sugnaaday Cadaab wayn.

وَلَا تَتَّخِذُوا أَيْمَانَكُمْ دَخَالًا بَيْنَكُمْ فَتَزِلَّ قَدَمٌ
بَعْدَ ثُبُوتِهَا وَتَذُوقُوا السُّوءَ بِمَا صَدَدْتُمْ عَنْ
سَبِيلِ اللَّهِ وَلَكِنَّ عَذَابَ عَظِيمٍ ﴿٣٨﴾

95. hana ku gadanina ballanka Eebe qiimo yar (waxba) waxa Eebe agtiisa ah yaa idiin khayrroone haddaad wax ogtihiin.

وَلَا تَنْسَوُا بِاللَّهِ تَمَنَّا قَلِيلًا إِنَّمَا عِنْدَ اللَّهِ
هُوَ خَيْرٌ لَكُمْ إِن كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٣٩﴾

96. waxa agtiinna ah wuu dhamaan waxa Eebe agtiisa ahna wuu hadhi waxaana ku abaal marinaynaa kuwa samra (adkaysta) Ajirkooda midka ugu fiican ee ay falayeen.

مَا عِنْدَكُمْ يَنْفَدُ وَمَا عِنْدَ اللَّهِ بَاقٍ وَلَنَجْزِيَنَّ
الَّذِينَ صَبَرُوا أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا
يَعْمَلُونَ ﴿٤٠﴾

Eebe wuxuu Aayadahan ku shegi in ahdduu doono uu Dadka wada marinlahaa waddo qudha kana yeeli lahaa Ummad kaliya, waxayse keentay xigmadiisu inay cidna dhunto midna hanuunto camalkoodan uu warsado Qiyaamada, tan kale wuxuu ka reebi inay xaqa ka leexdaan oo simbiiriixdaan, dhaartana isku khayaaamaan, markaa ay dhadhamiyaan ciqaab kaleexashada iyo ka leexinta jidka Eebe, cadaab wayna u sugnaado, iyo inaan lagu gadanin ballanka Eebe Qiimo yar, waxa addunka jooga oo dhanna waa yar yahaye, waxaana kahyr roon waxa Eebe agtiisa ah hadday wax garan, waxa Dadka agtiisa ahna way dhammaan oy tegi, waxaase hadhi oo waari waxa Eebe agtiisa ah oo camalfiican, Ajir iyo khayra, waxaana lagu abaal marin kuwa dar Eebe u samra Ajirkooda ugu fiican camalkoodii dartiis.

Aayaduhuna waxay ku tusin in ballanka la dhawro, in hanuunka lagu dadaalo, inaan dhaarta Dadka lagu khayaaamin, inaan xaqa Dadka laga celinin lagana leexin, in dadka iyo waxay haystaan tagi, Eebe iyo xaquna hadhi. An-Naxl (93-96).

97. Ciddii camal fasha wanaag oo Raga ama haweena isagoo mu'mina waxaan noolaynaynaa Nolol wanaagsan, waxaana ku abaal marinaynaa Ajirkooda waxa ugu Wanaagsan ee ay falayeen.

مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أَنْثَىٰ وَهُوَ
مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيٰوةً طَيِّبَةً وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ
أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٤١﴾

98. markaad akhriyi Quraanka ka magan gal Eebe shaydaan la dheereeyey.

فَإِذَا قَرَأْتَ الْقُرْءَانَ فَاسْتَعِذْ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيْطٰنِ
الرَّجِيْمِ ﴿٤٢﴾

99. isagu kuma leh xujo kuwa rumeeyey xaqa Eebahoodna talo saarto.

إِنَّهُ لَيْسَ لَهُ سُلْطَانٌ عَلَى الَّذِينَ آمَنُوا وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٩٩﴾

100. wuxuuse xujo ku yeeshaa kuwa ka wali yeesha iyo kuwa la wadaajiya Eebe.

إِنَّمَا سُلْطَانُهُ عَلَى الَّذِينَ يَتَوَلَّوْنَهُ وَالَّذِينَ هُمْ بِهِ مُشْرِكُونَ ﴿١٠٠﴾

101. haddaan ku badallano Aayad meel Aayad kale Eebana ogyahay wuxuu dejin waxay dhahaan waxaad uun tahay Beenabuurte, badnakooduse wax ma oga.

وَإِذَا بَدَأْنَا آيَةً مَّكَانَ آيَةٍ وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا نَزَّلُ قَالُوا إِنَّمَا أَنْتَ مُفْتَرٍ بَدَأَ كَثْرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٠١﴾

102. waxaad dhahdaa waxaa ka soo dejiyey Ruuxii Daahirka ahaa (Jibriil) xagga Eebaha si xaq ah inuu ku sugo kuwii rumeeyey xaqa iyo hanuun iyo Bishaaro isagoo u ah Muslimiinta.

قُلْ نَزَّلَهُ رُوحُ الْقُدُسِ مِنْ رَبِّكَ بِالْحَقِّ لِيُثَبِّتَ الَّذِينَ آمَنُوا وَهُدًى وَبُشْرَىٰ لِلْمُسْلِمِينَ ﴿١٠٢﴾

Rag iyo haween ciddii wanaag fasha waxaa lagu Abaal marin Wanaag illeen Waa loo siman yahay cibaadada Eebe iyo Khayrkiisa iyo Wanaaggiisee, wuxuuna Eebe ku noolayn Nolol wanaagsan, Waxaana Xadiith ku sugnaa: Waxaa liibaanay Ruuxii muslim noqda oo lagu arsuqo Kafaaf oo ku raali noqda waxa Eebe ku arsuqo, Waxaa wariyay Imaam Axmed iyo kuwo kale. Marka Quraanka La akhriinna waa in Eebe shaydaanka laga magan galo, Awoodna kuma leh Mu'miniinta Eebahood tala saarta ee wuxuu awood iyo suldo ku leeyahay Kuwa ka wali yeesha ee raaca dhumintiisa iyo Xumaantiisa iyo kuwa Eebe La wadaajiya Cibaadada, Marka Eebe aayad mid kale ku badalana waxay Dhahaan Gaaladu waa Been abuurasho, Eebaase Og wuxuu soo Dejin, Xaqna ku Soo dejiyay, Jibrilla usoo dhiibay, waase Jaahiliin badnakoodu, Wuxuuna Usoo dejiyay inuu ku sugo waxa xaqa rumeeyay, Hanuun iyo bishaarana u noqdo Muslimiinta, halkaasna waxaa ka muuqda in Ruuxii mu'mina oo toosnaada Rag iyo Haweenba Eebe ku noolayn nolol fiican, Aakhirana khayr siin, Inuu shaydaan col yahay lagana magan galo Eebe mar walba iyo marka Quraanka la akhriin inuusan Awood ku lahayn shaydanku mu'miniinta Eebe tala Saarta, ee uu Awood iyo Suldo ku leeyahay kuwa Talo u dhiibta ee ugu Shariig yeela Eebe, in Eebe awoodda isagu iska leeyahay soo dajinna jiray wuxuu doono oo Quraanka ah. An-Naxl (97-102).

103. Waxaan dhab u ognahay inay dhihi Waxaa bara Nabiga Quraanka dad, Carrabkay ku leexin waa Cajami Kanna waa Lisaan (af carabi) cad.

وَلَقَدْ عَلَّمْتُمُ الْقُرْآنَ وَقُلْتُمْ إِنَّمَا يَلْمِزُكُمْ بِهِ بَشَرٌ أَلْسَانُ الَّتِي يَلْعَنُونَ إِنَّهُ أَعْجَبُ وَهَذَا لِسَانٌ عَرَبِيٌّ مُبِينٌ ﴿١٠٣﴾

104. Kuwaan rumayn Aayaadka Eebe ma Hanuuniyo Eebe Waxayna Mudan cadaab daran.

إِنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِآيَاتِ اللَّهِ لَا يَهْدِيهِمْ اللَّهُ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٠٤﴾

105. Waxaa uun abuurta Been kuwaan rumayn Aayaadka Eebe kuwaasuna iyaga umbaa Beenaalayaala.

إِنَّمَا يَقْتَرِي الْكَذِبَ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِآيَاتِ اللَّهِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْكَاذِبُونَ ﴿١٠٥﴾

106. Oo ah kuwa Eebe ka gaaloobay rumayn ka dib (ee mudan halaag) Ruux lagu Qasbay qalbigiisuna ku Xasilla-nyahay iimaanka mooyee, ruuxiise laabtiisu u Waasac noqoto (rumayso) Gaalnimo Waxaa korkooda ah Cadho Eebe, Waxayna Mudan Cadaab wayn.

مَنْ كَفَرَ بِاللَّهِ مِنْ بَعْدِ إِيمَانِهِ إِلَّا مَنْ أَكْرَهَ
وَقَلْبُهُ مُطْمَئِنٌّ بِالْإِيمَانِ وَلَكِنْ مَنْ
شَرَّحَ بِالْكَفْرِ صَدْرًا فَعَلَيْهِمْ عَذَابٌ
مِنَ اللَّهِ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٠٦﴾

107. Arrintaasuna waa inay ka doorteen Nolosha dhaw (ee adduun) Aakhiro iyo Inaan Eebe hanuuninayn kuwa gaalada ah.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ اسْتَحَبُّوا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا
عَلَى الْآخِرَةِ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي
الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ ﴿١٠٧﴾

108. Kuwaas Eebaa daboolay quluub-tooda, Maqalkooda iyo Aragooda waa-na kuwa uun Halmaansan (xaqa).

أُولَٰئِكَ الَّذِينَ طَعِبَ اللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ وَسَمِعِهِمْ
وَأَبْصَرِهِمْ وَأُولَٰئِكَ هُمُ الْعُقَلْبُونَ ﴿١٠٨﴾

109. Waxaa sugan in kuwaasu aakharo ay Iyagu uun Khasaareen.

لَا جَرَءَ أَنَّهُمْ فِي الْآخِرَةِ هُمُ الْخَاسِرُونَ ﴿١٠٩﴾

Gaaladu wax kasta oo Ceeba oo u muuqata way ku sheegeen Nabiga iyo Quraankaba, intay ka dhahaan waxaa wax bara Nin cajami ah, Eebaase Beeniyay tirtirayna beentoodii Illeen Quraanku waa carabi cade, Cid Dhuntay oon rumaynayn Xaqana Eebe ma waafajiyo Hanuun iyo Xaqa, Waxayn mudan Ciqaab daran, Beenna waxaa abuurta Kuwaan rumaynin Aayaadka Eebe ee uun Beenaalayaasha ah, ee ah kuwa Gaalooba rumayn ka dib Cid lagu Qasbo oo Qalbigeedu xaqa ku sugan yahay mooyee, Ciddiise Qalbigeedu aqbalo gaalnimada waxaa korkooda ah Cadho Eebe, waxayna Mudan Cadaab wayn, Illeen adduunbay aakhiro ka doorteene, Eebana Ma hanuuniyo waana kuwa Eebe daboolay Qalbigooda, Maqalkooda iyo Aragooda ee halmaamay Xaqa, Dhab ahaanna u khasaaray, waana in Eebe Laga baryo ku sugnaanta diinta, laguna dadaalo Ku sugnaanteed, Ciddii dooni inay aragto siday mablimiintii hore ugu sugnaayeen Diintooda Ha akhirdo Taariikhda bilaal, Xubayb binu Zayd, Cabdullaahi binu Xudaafa iyo Kuwo kale wuxuu arki Geesinimada iyo adkaysiga iyo Xaq ku sugnaanta. An-Naxl (103-109).

110. Eebahaase kuwa Hijrooday intii la fidmeeyey (la dhibay) ka dib markaas jahaaday oo samray (adkaystay) Eeba-haana intaas ka dib waa u dambi dhaafe Naxariista.

ثُمَّ آتَىٰ رَبَّكَ لِلَّذِينَ هَاجَرُوا مِنْ بَعْدِ مَا
فُتِنُوا أَنَّهُمْ جَاهِدُوا وَأَصَابُوا إِيَّاكَ مِنْ
بَعْدِهَا الْعُقُورُ رَجِيمٌ ﴿١١٠﴾

111. waana Maalin ay imaan naf walba iyadoo ka doodi (Daafici) nafteeda oo loo Oofin naf kasta waxay fashay lana dulminayn.

* يَوْمَ تَأْتِيٰ كُلُّ نَفْسٍ مَّجْدُلَةٌ عَنْ نَفْسِهَا وَوُفِّيٰ
كُلُّ نَفْسٍ مَّا عَمِلَتْ وَهَمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿١١١﴾

112. Eebe wuxuu tusaale ka yeelay Magaalo ahayd aamin oo xasiloon ugana yimaaddo risqigeedu (Cunnada)

وَصَرَبَ اللَّهُ مَلَائِقَتَهُ كَأَنَّ عَائِمَةَ مُطْمَئِنَّةٌ
يَأْتِيهَا رِزْقُهَا رَغَدًا مِنْ كُلِّ مَكَانٍ فَكَفَّرَتْ

oo barwaaqo ah meel kasta oo ka Gaalowday Nicmooyinkii Eebe oo Eebe dhadhansiiyey Gaajo dabooshay iyo cabsi waxay sameynayeen darteed.

يَأْتِعُرُ اللَّهُ فَأَذَقَهَا اللَّهُ لِيَأْسَ الْجُوعِ وَالْخَوْفِ بِمَا
كَانُوا يَصْنَعُونَ ﴿١١٣﴾

113. waxaa dhab ahaan ugu yimid Rasuul ka mida wayna beeniyeen, waxaana qabtay Cadaab iyagoo Daalimiina.

وَلَقَدْ جَاءَهُمْ رَسُولٌ مِنْهُمْ فَكَذَّبُوهُ فَأَخَذَهُمُ
الْعَذَابُ وَهُمْ ظَالِمُونَ ﴿١١٣﴾

Ciddii ay u Suuroobiwaydo inay dar Eebe u Hijrooto, ka dibse hijroota intii la dhibay markaas Jahaadda oo adkaysata Eebe wuu u dambi dhaafi una Naxariisan, Maalinta Qiyaamana waa Maalin naf kasta ay ka doodi oy ka murmi, Naf kastana loo oofin waxay Camal fashay, oon lana dulmiyeyn, waxaana tusaale ugu filan Magaalo aamin iyo nabad ahayd Cunaduna uga imaan jirtay meel kasta oo ka Gaalowday Nicmooyinkii Eebe oo Eebe dhadhansiiyey Gaajo iyo Cabsi camalkoodii dartiis, waxaana u yimid Rasuul ka mida ooy Beeniyeen markaas cadaab Qabtay iyagoo daalimiina.

Ibnu kathiir wuxuu yidhi: Taasi waa tusaale Maka waxay ahayd Aamin xasilloon ciddii gashana Aamin Noqon, markaasay gaalowday oo diiday Nicmooyinkii Eebe una wayneyd oo bixintii Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wayna caasiyeen Rasuulkii wayna Khilaafeen intuu Abaar ku habaaro oo markaas Abaari ku dhacday waana Abaalka xaq diide oo dhan. An-Naxl (110-113).

114. ee cuna waxa Eebe idinku Arsuqay ee xalaasha fiicana kuna shukriya Nicmada Eebe haddaad isaga Caabudaysaan.

فَكُلُوا مِمَّا رَزَقَكُمُ اللَّهُ حَلْالًا طَيِّبًا
وَأشْكُرُوا لِعَمَّتِ اللَّهُ إِنْ كُنْتُمْ إِتَاءةً
تَعْبُدُونَ ﴿١١٤﴾

115. wuxuu uun idinka xarrimay Bakh-tiga, Dhiigga, Hilibka Doofaarka iyo wixii lagu gawraco waxaan Magaca Eebe ahayn, ciddii dhibaatoota (Gaajo) iyadoon dulmiyiyin xadna gudbin Eebe waa dambi dhaafe Naxariista.

إِنَّمَا حَرَّمَ عَلَيْكُمُ الْمَيْتَةَ وَالذَّمَّ وَالْحَمْرَ
الْخَنِزِيرَ وَمِمَّا أَهْلَ لَغْوِ اللَّهِ بِهِ فَمَنْ أَضْطَرَّ غَيْرَ بَيْعٍ
وَأَعَادِ فَإِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١١٥﴾

116. ha dhihina wuxuu carrabkiina ku tilmaami been kani waa xalaal kanna waa xaaraan, inaad ku been abuurataan Eebe, kuwa ku Been abuurta Eebe ma Liibaanaan.

وَلَا تَقُولُوا لِمَا تَصِفُ أَلْسِنَتُكُمُ الْكَذِبَ هَذَا
حَلْالٌ وَهَذَا حَرَامٌ لِنُفِقْنَا وَرَأَى عَلَى اللَّهِ الْكَذِبُ
إِنَّ الَّذِينَ يُفْتَرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ لَا يُفْلِحُونَ ﴿١١٦﴾

117. waa Nolol yar (Adduunku) waxay-na mudan Cadaab daran.

مَنْعَ قَلِيلٍ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١١٧﴾

118. kuwii Yuhuudoobay waxaan ka xarrimnay waxaan kaaga qisoonay hor-ray, mana aanaan dulmiyiyin iyagaase naftooda Dulmiyey.

وَعَلَى الَّذِينَ هَادُوا حَرَّمْنَا مَا فَضَّلْنَا عَلَيْكَ مِنْ قَبْلُ
وَمَا ظَلَمْنَاهُمْ وَلَكِنْ كَانُوا أَنْفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿١١٨﴾

119. markaas Eebahaa kuwa xumaan ku fala Jaahilnimo markaas toobadkeena intaas ka dib oo suubiya Camalka Eebahaa ka dib wuu u dhaafi una Naxariisan.

ثُمَّ إِنَّ رَبَّكَ لِلَّذِينَ عَمِلُوا السُّوءَ بِجَهْلَةٍ ثُمَّ تَابُوا مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَأَصْلَحُوا إِنَّ رَبَّكَ مِنْ بَعْدِهَا لَغَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١١٩﴾

Xalaasha waa in la Cuno xaaraantana laga fogaado sida Bakhtiga, dhiiga, Hilibka Doofaarka, waxa lagu xuso waxaan magaca Eebe ahayn, Boolida iyo waxaan ku banaanayn Sharciga Islaamka iyo Diinta, ruuxiise ka yaaba khatar Gaajo darteed wuu ka Cunaa waxaan la gadwricin isagoon xad gudbayn dulmina falayn, waana in laga dheeraado inuu been iyo Cilmi darro la yidhaah kani waa xalaal kanna waa xaaraan isagoo been sheegi, ciddii Eebe ku been abuuratana ma Liibaanayso, Adduunkana wuxuu ku Noolaan wax yar, markaas cadaab daran Mudan; Yuhuudna waxaa laga xarrimay wixii horay loo soo sheegay Eebana ma dulmiyin ee iyagaa isdulmiyey, ciddiise Jaahilnimo dambi ku samaysa markaas Toobadkeenta oo suubida Eebe wuu u Dambi dhaafi una Naxariisan. Culimadii hore Qarkood waxay dheheen ciddii Eebe cassida waa Jaahil, saas darteed waa in xalaal la Cuno, xaqa lagu hadlo, la Toobadkeeno. An-Naxl (114-119).

120. (Nabi) Ibraahim wuxuu ahaa Umad «Khayr Fare» Eebe adeece Xaqa u iishe mana ka mid ahayn Mushrikiinta.

إِنَّ إِبْرَاهِيمَ كَانَ أُمَّةً قَانِتًا لِلَّهِ حَنِيفًا وَلَمْ يَكُنْ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿١٢٠﴾

121. Kuna shukriya Nicmada Eebe wuuna doortay wuxuuna ku hanuuniyey Jidka Toosan.

شَاكِرًا لِأَنْعَمِهِ أَجْتَبَنَّهُ وَهَدَنَّهُ إِلَىٰ صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿١٢١﴾

122. waxaana siinay Adduunka wanaag, aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa Suuban.

وَأَقْبَنَتْهُ فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَإِنَّهُ فِي الْآخِرَةِ لَمِنَ الصَّالِحِينَ ﴿١٢٢﴾

123. mrkaas waxaan kuu waxyoonaay Nabiyouw raac Diinta (Nabi) Ibraahim ee Toosan kama mid ahayn Mushriikiinta.

ثُمَّ أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ أَنْ اتَّبِعْ مِلَّةَ إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿١٢٣﴾

124. Sabtida waxaa uun looyeelay kuwii isku khilaafay, Eebahaana wuu kala xukumi dhexdooda Maalinta Qiyaame waxay isku Khilaafayeen.

إِنَّمَا جُعِلَ السَّبْتُ عَلَى الَّذِينَ اخْتَلَفُوا فِيهِ وَإِنَّ رَبَّكَ لَيَحْكُمُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فِيمَا كَانُوا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿١٢٤﴾

125. ugu yeedh Jidka Eebahaa si xigmada iyo Wacdi fiicana kulana dood sida u fiican, Eebahaana wuu ogyahay cidda ka dhunta Jidkiisa wuuna ogyahay kuwa Hanuunsan.

ادْعُ إِلَى سَبِيلِ رَبِّكَ بِالْحُكْمِ وَالْمَعْرَظَةِ الْحَسَنَةِ وَجَدِّدْ لَهُمْ بِآيَاتِنَا إِزْهَارًا فَهُمْ لَمْ يَأْتُواكَ بِشَيْءٍ لَمْ تَأْتِكُمْ مِنْ بَعْدِهَا لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٢٥﴾

126. haddad wax ciqaabaysaan u Ciqaaba inta laydin ciqaabay, haddaad samirtaana isagaa u khayr roon kuwa samra.

وَأَنْ عَاقِبْتُمْ فَاقْبُوا بِمِثْلِ مَا عُوقِبْتُمْ بِهِ
وَلَيْنَ صَبْرُكُمْ لَهُوَ خَيْرٌ لِلصَّابِرِينَ ﴿١٢٦﴾

127. Samir, mana aha samirkaagu dar Eebe mooyee, hana ka murugoon, hana ka cidhiidhyamin waxay Dhagri.

وَأَصْبِرْ وَمَا صَبْرُكَ إِلَّا بِاللَّهِ وَلَا تَحْزَنْ عَلَيْهِمْ
وَلَا تَكُ فِي ضَيْقٍ مِّمَّا يَمْكُرُونَ ﴿١٢٧﴾

128. Eebana wuxuu la jiraa kuwa dhawrsada wuxuuna la jiraa kuwa samo fala.

إِنَّ اللَّهَ مَعَ الَّذِينَ اتَّقَوْا وَالَّذِينَ هُمْ
مُحْسِنُونَ ﴿١٢٨﴾

Nabi Ibraahim wuxuu ahaa Umad iyo Imaam Khayrka lagaga daydo, oo Eebe adeeca xaqana ku toosan Mushrikiinta ka fog, Nicmada Eebana ku Mahdiya, Eebaana doortay, hanuuniyeyna, siiyeyna Adduunka wanaag, Aakharana ka yeelay kuwa Suuban, markaas Nabiga faray inuu raaco Diintii Nabi Ibraahim ee Toosnaa, Saas darteed waa inaan xaqa ku noqonaa imaam lagu daydo oo khayrka u hogaamiya, tan kale wuxuu Eebe ka warramay sida Yuhuud loogu yeelay Sabtida inay Cibaadaystaan Nastaanna, sida Umaddeenna loogu yeelay Jamcada, wayse iskhilaafeen Yuhuud, Eebaase kala xukumi Qiyaamada waxay isku khilaafeen, waana in Dadka xaqa loogu yeedho lana tusiyo si xigmad iyo kaadsiinyo iyo waano fiicana, ahaynna adayg iyo canaan iyo darraan, waana in sida u fiican loogula doodo xaqa ciddii xaqa ku doodi, Eebana waa ogyahay cidda dhumi iyo tan hanuuni, haddii la ciqaabi oo laga aarsan cid kugu xad gudubtana waa in un la ciqaabo wax la'eg waxay Ciqaabeen haddii lays ka samraana u fiican ciddii samirta, dar Eebaana loo samraa, sidii Nabiga kana reebay Eebe inuu ka murugoodo cidii Beenisa oo khilaafta kana cidhiidhyamin dhagartooda, Eebana wuxuu la jiraa kuwa dhawrsada iyo kuwa samo fala. Markii sayid Xamze lagu dilay Uxud lagana jeejxeyay Jidhkiisii yuu Nabigu yidhi: waxaan ugu aari Toddobaatan Markaasay soo degtay. An-Naxl (120-128).



Suurat Al-Israa'

سُورَةُ الْإِسْرَاءِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. waxaa Nasahan (Ceeb ka fog) Eebaha ka guuriyey Addoonkiisa (Nabiga) Habeen masaajidka Xurmada leh (Maka) xagga Masjidkii Aqsa een barakaynay Gaararkiisa inaan Tusinno Nabiga Aayaadkanaga Eebana waa maqle arka.

سُبْحَانَ الَّذِي أَسْرَى بِعَبْدِهِ لَيْلًا مِّنَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ إِلَى الْمَسْجِدِ الْأَقْصَا الَّذِي بَنَيْنَا لَهُ حَوْلَهُ لِنُرِيَهُ مِنْ آيَاتِنَا إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ ﴿١﴾

2. waxaana siinnay Nabi Muuse kitaabkii (Tawreed) waxaana uga yeellay hanuun Bani Israa'iil inaydaan ka yeelannin wax iga soo hadhay Wakiil.

وَأَتَيْنَا مُوسَىٰ أَلْكِتَابَ وَجَعَلْنَاهُ هُدًى لِّبَنِي إِسْرَائِيلَ آلَاةً تَسْتَخَذُونَ مِنْ دُونِ وَصِيَلَا ﴿٢﴾

3. faricii kuwaan la xambaarnay Nabi Nuux, wuxuuna ahaa Addoon (Eebe) ee Shugri badan.

دُرِّيَّةً مِّنْ حَمَلَتَا مَع نُوحٍ إِنَّهُ كَانَ عَبْدًا مَّكْرُورًا ﴿٣﴾

Eebe isagaa Adduun iyo Aakhiro iyo waxa dhexjoogaba Abuuray, cid abuurka kula murmina ma jirto, suu doono yuuna ugu Tasarrufaa una maamulaa, wuxuna Nabigiisii Muxamed ahaa (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka dheelmay kana Guuriyey Maka una guuriyey xagga Masaajidka Aqsa ee isna barakaysan, si Eebe u tusiyo Nicmooyinka Eebe, illeen Eebaa wax walbana maqla arkane, waxaana ku sugnaaday xaqnimada arrintaas Xadiithyo badan waxaana ka mida xadiithka dheer ee Bukhaari wariyey ee ah: Anas Binu Maalig wuxuu yidhi: Habeen laga guuriyey Rasuulka Masaajidka kacbada oy u yimaadeen saddex Ruux, waana xadiith ka warramaya wuxuu arkay Nabigu habeenka. Bayhaqina wuxuu wariyey in Nabigu uu arkay Nuur, Imaam Axmedna isna wuxuu wariyey xadiith ku saabsan xaalkan, waxayna sugi in Nabiga Maka laga dheelmay oo Qudsi loo dheelmay, in samada loo koriyey, inuu Nabiyadii la kulmay, in Salaadda la soo faray, inuu arkay dad badan oo la ciqaabi, sida kuwa salaadda ka cuslaaday, khamrada caba, xaaraanta cuna, Zinaysta, wax xanta, xaqa u hoggaansamin, iyo kuwo kale, wuxuuna arkay Jannadii iyo Naartii, Eebana wuu sharrifay Nabigiisa, sidaas daraadeed waa in si dhaba loo rumeeyo guurinta Nabiga iyo koridiisa cirka iyo waxyaalaha la faray iyo wuxuu arkay, waxaana shakin amma beenin Munaafiq iyo Gaalo, waa in lagu adkaado Diinta Eebe balkaas Nabiga ugeyey gaar ahaan Salaadda, xumaantana laga fogaado, ciddii doonta inay warbadan ka ogaato arrintan ha akhrido tafsiirka Aayadda, Aayadaha kale waxay ka warrami inuu Eebe Nabi Muuse siiyey Kitaabkii Tawreed, ee hanuunnaayey Bani Israa'iil uguna digaaeyey inayna wakiil ka dhiganayn wax Eebe ka soo hadhay, illeen waa faricii cidduu Eebe la koriyey Nabi Nuuxe, wuxuuna ahaa addoon mahadnaq badan, waana inay xusuustaan Nicmadaas xaqana ku toosnaadaan, Eebana si dhaba u caabudaan una aqoonsadaan, haddii kale dulli iyo ciqaab. Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: xadiithka dheelminta waxaa wariyey Anas, Cumar Binu Khadhaab, Cali, Ibnu Mascuud, Abii dar, Abii Hureere, Maalig Binu sacsacata, Abii Saciid, Ibnu Cabbaas, Shaddaad, Ubayi'Ibnu Camar, Jaabir, Abii Ayuub, xudeefe'Abii umaama, Samurra, Suhayb, Umu baani, Caa'isho Asmo. Al-Israa' (1-3).

4. Waxaan ku (Ogaysiinnay) ugu Waxyoonaay Banii Israa'iiil Kitaabka (Tawreed) inaad fasaadinaysaan Dhulka Labo Jeer, isna kibrinaysaan iskibrin Wayn.

وَقَضَيْنَا إِلَىٰ بَنِي إِسْرَائِيلَ فِي الْكِتَابِ لَتُفْسِدُنَّ فِي الْأَرْضِ مَرَّةً وَيَنْتَقِلْنَ عَلَیْكَ كَبِيرًا ۝٤

5. Markuu yimaaddo Yabooha (Waqtiga) midda hore waxaan idinku soo Bixinnaa «Dirraa» Addoomadanada oo Xoog daran leh, dhexgalina (Hanan) Guryaha dhexdooda waana Yaboo la fali.

فَإِذَا جَاءَ وَعْدُ أُولَئِهِمَا بَعَثْنَا عَلَيْكُمْ عِبَادًا لَنَا أُولِي بَأْسٍ شَدِيدٍ فَجَاسُوا خِلَالَ الدِّيَارِ وَكَانَ وَعْدًا مَّفْعُولًا ۝٥

6. Markaasaan idinku soo Celinnaa Dawladnimada, idinkuna Xoogaynaa Xoolo iyo Carruur, idinkana yeellaa kuwa Tiro badan.

فُرَزَّ دَرْدَنَا لَكُمْ الْكُفْرَ عَلَيْهِمْ وَأَمَدَدْنَاكُمْ يَا مُؤْمِنِينَ وَبَيْنَ وَجَعَلْنَاكُمْ أَكْثَرَ نَفِيرًا ۝٦

7. haddaad Samo Fashaan waxaad u samo fasheen Naftiinna, haddaad Xumaan fashaanna waa uun Naftiinna, markuu Yimaaddo Yabooha Dambana way Xumeeyaan Wajigiinna iyo inay Galaan masaajidka (Baytul Maqdis) siday u galeen markii hore iyo inay Dammiraan «Tirtiraan» waxay u Adkaadaan Tirtirid.

إِن أَحْسَنُ نَمْرًا أَحْسَنُ نَمْرًا أَحْسَنُ نَمْرًا أَحْسَنُ نَمْرًا وَأَن أَسْأَفُ فَلَهَا ۝٧
فَإِذَا جَاءَ وَعْدُ الْآخِرَةِ لِيَسْتَوْفُوا وَجُوهَهُمْ وَلِيَدْخُلُوا الْمَسْجِدَ كَمَا دَخَلُوهُ أَوَّلَ مَرَّةٍ وَلِيَسْتَوْرُوا مَا عَلَوْا أَنْتَبِيرًا ۝٨

8. Waxay u Dhawdahay in Eebihiiin idiin Naxaariisto, haddaad ku Noqotaanna waannu ku noqon, waxaana uga yeelnay Jahannamo Gaalada Gogol.

عَسَىٰ وَرُبُّكَ إِن يَرَىٰ حِمْرًا وَإِن عُدُّهُ عَدْنَا وَجَعَلْنَا جَهَنَّمَ لِلْكَافِرِينَ حَصِيرًا ۝٩

Aayadahanna wuxuu Eebe kaga warrami Xaalka Banii Israa'iiil iyo inay Fasaadin Dhulka Labo Jeer aadna isula weynaan, isuna Kibrin, markaas Labada Jeerba lagu diri Addoomo Eebe oo Daran Dhulkana ka Dhex geli kana qabsan, Cigaab iyo Halaagna Dhadhansiin, hadday Wanaag Falaanna waa uun Naftooda hadday Xumaan falaanna waa Dhibka Naftooda, wuxuuna Eebe sugay in Marka Dambe Masjidka Qudsi Loogu gali Xumaan iyo Xanuuna ay la kulmi, Naxariista Eebase way u Furantahay Ciddii Eebe u Noqon oo Toobad Keeni, haddayse Xumaanta ku Noqdaan Eebana wuxuu ku noqon Cigaabtooda iyo Abaal marintooda, Jahannamana waa Gogosha Gaalada, waxbadan yey Culimadu ka hadleen Arrintaas laakiin Eebaa og inay tegtay iyo inay Dhimantahay. Maxaa diidi haddii lagu Cigaabo Gacmaha Muslimiinta Qudsina laga soo Celiyo. Al-Israa' (4-8).

9. Quraankanna wuxuu ku Hanuunin Dadka Arrinta u Toosan ugana Bishaarayn kuwa fala Wanaag inay Mudan Ajir wayn..

إِنَّ هَذَا الْقُرْآنَ يَهْدِي لِلَّذِي هِيَ أَقْوَمُ وَيُنذِرُ الْمُؤْمِنِينَ الَّذِينَ يَعْمَلُونَ الصَّالِحَاتِ أَنَّ لَهُمْ أَجْرًا كَبِيرًا ۝١٠

10. Kuwaan Rumeynin Aakhirana waaxaan u Darabnay Cadaab Daran.

وَأَنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ أَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٠﴾

11. Wuxuu u Yeedhaa (Baryaa) Dadku Shar siduu ugu Yeedho «Baryo» Khayrka, Dadkuna waa Deg dege.

وَيَدْعُ الْإِنْسَانَ بِالشَّرِّ دُعَاءَهُ بِالْخَيْرِ وَكَانَ الْإِنْسَانُ نَجُورًا ﴿١١﴾

12. Waxaan ka Yeellay habeenka iyo Maalinta Labo Calaamo, waxaana Tirraa Calaamada Habeenka, waxaana ka Yeellaa Calaamada Maalinta mid dhexdeeda wax lagu arko, inaad doontaan Fadliga Eebihiin iyo inaad ku ogaataan Tirada Sanooyinka iyo Xisaabta, wax kastana waxaannu u Caddeynay Cad-dayn (aada).

وَجَعَلْنَا اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ آيَاتَيْنِ لِمَن يَحْكُمُ بَيْنَهُ يَتَذَكَّرُ أَلْفَ عَشْرٍ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٢﴾

13. Ruux kasta waxaan Laasiminnay Camalkiisa (loo Qaddaray) Luquntiisa, waxaana u soo bixinnaa Maalinta Qiyaame Kitaab uu la kulmi Isagoo fidsan.

وَكُلَّ إِنْسَانٍ أَلْفَ مِائَةٍ طَبَعَهُ فِي عُنُقِهِ وَنُحِّجَ لَهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ كِتَابًا يَلْقَاهُ مَنسُورًا ﴿١٣﴾

14. Laguna Dhihi akhri Kitaabkaaga isagaa kuugu Filan Maanta Korkaaga Xisaabe.

أَفَرَأَيْتَكَ كَيْفَ بَشَّرْنَاهُ أَيَّامَ حَسَبِ آتِهَا ﴿١٤﴾

Quraankuna wuxuu ku Toosin Dadka Arrinta ugu Toosan uguna Fiican xagga Caqiidada, Xukunka, Akhlaaqda, Macaamilada iyo wax kasta oo Wanaag lagu gaadho Adduun iyo Aakhiraba, wuxuuna ugu Bishaarayn Mu'miniinta Wanaaga fala Ajir wayn, kuwaan Eebe iyo Aakhro Rumayna Cadaab daran in loo darbay, tan kale Dadku wuu Degdegaa isagoo shar iyo Balaayo Baryi sida Khayrka iyo Wanaagga, waxaana Xadiitha: Ha habaarina Naftiinna iyo Xoolihiinna waxaa laga yaabaa inaad ka waafaqdaan Eebe Saacad la Ajiibo oo laydin Ajiibo, Eebana wuxuu ka yeelay Habeenka iyo Maalinta Calaamad ku tusin Qudradiisa, iyo inay Xasilaan Habeenkii, una socdaan Maalintii shaqo iyo Sanco iyo Camal iyo Safar, kuna Ogaadaan Ayaamaha, Jumcooyinka, Bilaha iyo Sanooyinka, Wuxuuna Eebe caddeeyey wax kastoo loo baahanyahay, ruux kastana waxaa laasimi oo laxidhiidhi Camalkiisa, Qiyaamadana waxaa loo soo Bixin Kitaab uu la Kulmo isagoo Fidsan, laguna dhihi Akhri Kitaabkaaga iyo Xaashidaada kuugu filan Maanta Xisaabe, saas darted mar haddaan haysanno Quraankana wanaagga ku Toosin waa inaan Qabsannaa oon Raacna kuna fara adaygnaa. Al-Israa' (9-14).

15. ruuxii Hanuuna wuxuu uun u Hanuunay Naftiisa kii Dhumana wuxuu uun u Dhumay Naftiisa, mana xambaarto Nafi Dambi Naf kale, mana Cadaabno intaan ugu soo Diroo Ra-suul.

مَنْ أَهْتَدَىٰ فَأِنَّمَا يَهْتَدِي لِنَفْسِهِ وَمَنْ ضَلَّ فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيْهَا وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰ ۗ وَمَا كُنَّا مُعَذِّبِينَ حَتَّىٰ تَبْعَثَ رَسُولًا ﴿١٥﴾

16. Markaan doonno inaan Halaagno Qaryad waxaan farraa kuweeda loo Nicmeeyey "Khayr" markaasay ka Faasiqoobaan waxaana ku sugnaada Ciqaab waana Tirtirraa Tirtirid (halaag).

وَإِذَا أَرَدْنَا أَنْ نُهْلِكَ قَرْيَةً أَمَرْنَا مُدْرِكِيهَا فَفَسَدُوا فِيهَا
فَقِيَ عَلَيْهَا الْقَوْلَ فَدَمَّرْنَا تَدْمِيرًا ﴿١٦﴾

17. Immisaan Halaagnay Quruun (Nabi) Nuux ka dib Eebahaabaana ugu filan Dambiyada Addoomadiisa Ogaade Arka.

وَكُرِّهْنَا أَنْ نَمُنَّ بِمَا نَعْبُدُهُمْ إِلَّا لِيُقَرَّبُوا إِلَيْنَا كَمَا يُقَرَّبُونَ لِلَّهِ إِنَّهُمْ يَخْتَصِمُونَ بَيْنَنَا وَبَيْنَ اللَّهِ فَيُضِلُّونَ سَبِيلَ اللَّهِ لِيُنْفِجَهُمْ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِمْ فَيَقْبَلُوا لَهُمْ دُؤُوبَهُمْ فَهُمْ عَلَيْهِمْ يُصْعِقُونَ ﴿١٧﴾

18. Ruuxii dooni Adduunyo waan ugu soo dedejinnaa dhexdeeda waxaan Doonno cidaan doonno, markaasaan kayeellaa Jahannamo mid gala isagoo Caayan oo Dullaysan.

مَنْ كَانَ يُرِيدِ الْعَاجِلَةَ عَجَلْنَا لَهُ فِيهَا مَا نَشَاءُ لِمَنْ نُرِيدُ ثُمَّ جَعَلْنَا لَهُ جَهَنَّمَ يَصْلَاهَا مَدْمُومًا
مَدْحُورًا ﴿١٨﴾

19. Ciddiise Doonta Aakhiro oo fala camalkeedii isagoo Mu'mina kuwaas Camalkoodu wuxuu Noqon mid la Mahdiyo.

وَمَنْ أَرَادَ الْآخِرَةَ وَسَعَىٰ لَهَا سَعْيَهَا وَهُوَ مُؤْمِنٌ
فَأُولَٰئِكَ كَانَتْ سَعِيَّتُهُم مَّشْكُورًا ﴿١٩﴾

Ciddii Hanuunta wuxuu uun wax u taray Naftiisa, tii dhuntana waxay uun Dhibtay nafteeda, Nafna ma Qaaddo dambi Naf kale, Eebana Dadka ma Cadaabo isagoon u soo Dirin Rasuul Xaqa u Caddeeya oo tusiya Jidka Toosan, markii Eebe Halaagi Magaalo ama Umadna waxaa xaqa iyo Wanaagga diida oo ka Faasiqooba kuwa Xoolaha loogu Nicmeeyey iyo kuwo xun oo Madax ah, Markaasay Ciqaabii Eebe ku Dhacdaa, lana Halaagaa halaag Dhaba, in badan yuuna Eebe halaagay Quruumo Nabi Nuux ka dib, Eebana Ogaansho iyo Arkid ugu filan Dambiyada Addoomadiisa, ciddii Jecel oo Camalkiisa la dooni adduunyo iyo Dhalanteedka, wuxuu Eebe ka siiyaa wax Ciddu doono wuxuu doono, markaasuu galiyaa Jahannamo isagoo caayan oo Dullaysan, ciddiise Doonta Aakhiro oo u Camal fasha isagoo Mu'min Xaqa Rumeeyey ah kaasi waa mid la Mahdiyo Camalkiisa, Taasina waxay ku tusin in Naf walba iyadu Masuulka Koobaad iska tahay Nacfi iyo Dhiba, Xumaanta ku kibirka, Xoolaha iyo Ladnaanta iyo awoodda iyo inay Ciqaab sabab u Noqon, inaan Eebe Ciqaabin Dadka isagoon Xaqa u caddayn, in Umado badan la halaagay nabi Nuux ka dib, Adduunyo uun ruuxii doonana wuxuu ka heli wuxuu Eebe doono, waxaana u Dambayn Naar isagoo Caayan oo Dullaysan, Ruuxiise la Doona Camalkiisa aakhiro camalna u fala isagoo Mu'min ah oo Raaci Nabiga Camalkiisa iyo Islaamka, wuu mahdin Camalkiisa lana mahdin, adduunyardana in kastooy xaq tahay in xalaasha si fiican looga doono haddana ma aha in laga dabo dhaco oo lagu waasho Xalaal iyo Xaaraan.

Waxaa xadiith ah: adduunku waa Guri cidaan Guri lahayn iyo Xoolo Ruuxaan xoolo lahayn, waxaana u kulmiya cidaan Caqli lahayn. Al-Israa' (15-19).

20. Dhammaan waxbaan uga Fidinnaa kuwaas (Doona Adduun) iyo kuwaas (Doona aakhiro) siismada Eebahaa, mana aha siismada Eebahaa mid Reeban.

كُلًّا نُمِدُّهُنَّ يَوْمَآ وَهُنَّ لِيَوْمِ عَطَاءِ رَبِّكَ
وَمَا كَانَ عَطَاءُ رَبِّكَ مَحْظُورًا ﴿٢٠﴾

21. Day sidaan uga Fadilnay qaarkood qaarka (Kale) (Addunka) Aakharaase wayn darajooyin oo wayn Fadilid.

أَنْظُرْ كَيْفَ فَضَّلْنَا بَعْضَهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۗ وَالْآخِرَةُ
أَكْبَرُ دَرَجَاتٍ وَأَكْبَرُ تَفْضِيلًا ﴿٢١﴾

22. ha yeelin Eebe Miciisa ilaah kale ood noqotid mid Caayan oon loo gargaarin.

لَا تَجْعَلْ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ فَتَقْعُدَ مَقْعُومًا خَدُّوْلًا ﴿٢٢﴾

23. Wuxuu Faray Eebahaa inaydaan Caabudin isaga mooyee iyo inaad u samo fashaan Labadii Waalid Samo falid, hadduu ku gaadho Agtaada wayni midkood ama Labaduba ha ku Dhihin uf, hana Canaanana una dheh hadal Fiican.

* وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا
إِذَا بَلَغْنَ عِنْدَكَ السَّكِبَ أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا
تَقُلْ لَهُمَا آفٌ وَلَا تَنْهَرَهُمَا وَقُلْ لَهُمَا قَوْلًا
كَرِيمًا ﴿٢٣﴾

24. Una Raarici (Jilci) Garab Naxariiseed (u Naxariiso) dhehna Eebow ugu Naxariiso siday ii Koriyeen anoo Yar.

وَأخْفِضْ لَهُمَا جَنَاحَ الذَّلِيلِ مِنَ الرَّحْمَةِ وَقُلْ رَبِّ
أَرْحَمُهُمَا كَمَا رَبَّيْتَنِي صَغِيرًا ﴿٢٤﴾

25. Eebihiin wuu ogyahay waxa Naf-tiinna ku Sugaan, haddaad Suubbantihiin isagu kuwa Toobad keenka badan wuu u Dhaafaa «Dambiga».

رَبِّكَ أَغْفِرْ لِي مَا فِي نَفْسِي كَذَّبْتُكَ وَأَنَا صَالِحٌ فَإِنَّهُ
كَانَ لِلْأَوَّلِينَ عَفْوًا ﴿٢٥﴾

Cid walba Eebe wuu ka siin adduunka wuxuu doono Eebe cidnana kama reebana Deeqda Adduun ee Eebe, waana lagu kala Duwanyahay, Adduunka mid Xoolo leh mid Saboola, mid Fayow mid Buka iyo waxyaale kale, Aakharaase darajo wayn oo Fadli badan, sida Xadiith ku Sugnaaday in Dadka Darajooyinka sare ay u Arki kuwa kale sida xiddiga Jahada Cirka. Waana in Eebe kaliya la Cabudo oon Ilaah kale Loo yeelin si uusan Ruuxu u noqon mid Caayan, oo Khasaara, Eebana wuxuu Xukumay in Isaga kaliya la Caabudo, Labada Waalidna loo samo falo, haddii midkood ama Labadubana Agtaada ku Da'ooabaan ha Nicin oo Karaahiyeysan, hana ku dhihin hadal xun sida Uf iyo wixii la mida hana Canaanana, hadal fiicana u dheh, una Naxariiso, Eebana ka bari inuu u Naxariisto siday kuugu Naxariisteen kuuna Koriyeen Yaraantaadii, Eebana wuu ogyahay waxa nafiinna ku sugan, haddaad wanaagsantihinna Eebaa u dambi dhaafaa kuwa u Toobad keena, Bal day sida islaamku u waynceeyey xaqa Waalidka, Diintee iyo nadaamkee laga heli Naxariistaa iyo Qaddarintaa inta lala xidhiidhiyey xaqa Eebe, saas darted waa in si dhaba loo garto Islaamka looguna Dhaqmo, waalidkana loo Ixtiraamo loona naxariisto, waxaana Xadiithyo badan ku sugnaaday Addeecidda Waalidka iyo Xumaanta Caasigooda sida ruuxii soo Gaadha Labadiisii Waalid ama midkood oo Naar gala, Eebe ha ku fogeeyo (Abuu daa'uud) iyo Jannadu Lugta Hooyaday ku Hoos Jirtaa, (Imaam Axxmed) aaway kuwa ku qaylyi u roonida haweenka, mase waa sawaxan aan riiqid lahayn iyo Been cad. Al-Israa' (20-25).

26. Sii qaraabada xaqeeda iyo Miskiinka iyo socdaalka, hana ku xadgudbin bixin Xadgudub (iyo si xun).

وَأَبِئْ ذَا الْقُرْبَىٰ حَقَّهُ وَالْمِسْكِينَ وَابْنَ السَّبِيلِ
وَلَا تَبْذُرْ مَبْذُورًا ﴿٢٦﴾

27. illeen kuwa ku xadgudba waa walaalo Shaydaane, Shaydaanna Eebihiis wuu ka gaaloobay.

إِنَّ الْمَبْذُورِينَ كَانُوا إِخْوَانَ الشَّيْطَانِ وَكَانَ الشَّيْطَانُ
لِرَبِّهِ كَفُورًا ﴿٢٧﴾

28. haddaad ka jeedsato xaggooda (wax la'aan) adoo rajayn Naxariista Eebahaa ood rajayn waxaad ku dhahdaa hadal fudud (fiican).

وَأَمَّا عَرَضٌ عَنْهُمْ فَيَعْنَاهُ رَحْمَةٌ مِنْ رَبِّكَ تَرْجُوهَا
فَقُلْ لَهُمْ قَوْلًا مَيْسُورًا ﴿٢٨﴾

29. ha ka yeelin gacantaada mid ku xidhan Luquntaada hana wada fidin dhammaan ood noqoto mid la dagaalo oo tabar gaba.

وَلَا تَجْعَلْ يَدَكَ مَغْلُولَةً إِلَىٰ عُنُقِكَ وَلَا تَبْسُطْهَا كُلَّ
الْبَسْطِ فَتَقْعُدَ مَلُومًا مَّحْسُورًا ﴿٢٩﴾

30. Eebahaa wuu u fidiyaa Risqiga cidduu doono wuuna u qaddaraa «cidhiidhyaa» (cidduu doono) illeen Eebe Addoomadiisa waa oge arkee.

إِنَّ رَبَّكَ يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَن يَشَاءُ وَيَقْدِرُ إِنَّهُ كَانَ
بِعِبَادِهِ خَبِيرًا بَصِيرًا ﴿٣٠﴾

31. ha Dilina Carruurtiinna ka Cabsi-Faqri (Saboolnimo) annagaa Arsaayayna iyaga iyo idinkaba Dilkooduna waa Gaf wayn.

وَلَا تَقْتُلُوا أَوْلَادَكُمْ حَرِيصًا عَلَيْهِم مَّا بَلَغُوا الْحُلُمَ وَإِن كُنْتُمْ
فَتَاهَةً كَانَتْ خَطَايَا كَبِيرًا ﴿٣١﴾

Qaraabada, Masaakiinta iyo Musafirkaba waa in la xidhiidhiyo waxna la siiyo, lana xadgudbin ee si fiican wax loo Bixiyo, illeen mubadar waa Walaal Shaydaane, Shaydaan waa mid Eebe ka Gaalooba, haddaadan wax hayna Hadal fudud oo fiican ku dheh, waxaana xadiith ah: Ruuxii jecel in loo waasicyio Risqiga cimrigana loo dheereeyo ha xidhiidhiyo Qaraabadiisa. Waana in wax bixintu dhexdhexaad ahaato, oodan Gacanta Luqunta ku xidhin Bakhaylnimo, wada fidinna oo-lagu naco, ama fadhiisatid illeen Risqigana Eebaa haya oo u fidiya cidduu doono una qaddaraa tuu doono imtixaan, wuuna ogyahay Adoomadiisa iyo Maslaxadooda, waase in wax la bixiyo oo la sadaqaysto. Abuuhurayre wuxuu ka wariyay Rasuulka (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) Subax kasta oo addoomuhu soo Toosaan waxaa dhawaaqi Labo Malag oo mid dhihi Eebow wax bixiye badel sii, kan kalana dhihi Eebow hayste halaag sii. «waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim».

Tan kale waa inaan la layn Carruurta siday falayeen Jaahiliintu iyagoo Faqri ka yaabi illeen Eebaa dhamman arsaaqee, Dilkooduna waa gaf wayn oo xune, waana dambi daran oo adag sida cad. Al-Israa' (26-31).

32. Ha u dhawaannina sino illeen waa xumaane Waddana u xune.

وَلَا تَقْرَبُوا الرِّزْقَ الَّذِي آتَاهُ اللَّهُ كَاتِبِينَ فَحِشَّةً وَسَاءَ سَبِيلًا ﴿٣٢﴾

33. Hana dilina Nafta Eebe xarrimay Xaq Mooyee, Ruuxii lagu dilo Gardarro waxaan U yeellay waligiisa Xujo ee yuusan ku xad gudbin Dilka waa loo Gargaaraye.

وَلَا تَقْتُلُوا النَّفْسَ الَّتِي حَرَّمَ اللَّهُ إِلَّا بِالْحَقِّ وَمَن
فُتِلَ مَظْلُومًا فَقَدْ جَعَلْنَا لِرَبِّهِ سُلْطَانًا فَلَا يَسْرِفُ فِي
الْقَتْلِ إِنَّهُ كَانَ مُضْطَرًّا ﴿٣٣﴾

34. Hana u dhawaannina Xoolaha agoonta sida U fiican mooyee intay ka gaadhaan xoogooda, Oofiyana ballanka illeen Ballanka waa lays warsane.

وَلَا تَقْرَبُوا مَالَ الْيَتِيمِ إِلَّا بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ حَتَّىٰ يَبْلُغَ
أَشُدَّهُ وَآوُوا بِالْعَهْدِ إِنَّ الْعَهْدَ كَانَ مَسْئُولًا ﴿٣٤﴾

35. Oofiyana kaylka «beegidda» markaad beegaysaan kuna miisaama Miisaan toosan (caadila) Saasaa khayr roon oo Fiican cidhibe.

وَأَوْفُوا الْكَيْلَ إِذَا كُلْتُمْ وَرِزْقُ الْبَالِغِ طَائِفَةٌ مِّنَ الْمَسْتَقِيمِ
ذَلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴿٣٥﴾

36. hana dhihin (Raacraacin) Waxaa-

وَلَا تَقْفُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ إِنَّ السَّمْعَ وَالْبَصَرَ

dan u Cilmi lahayn, Illeen Maqalka, Aragga iyo Qalbigaba waa lays warsane.

وَأَلْفُؤَادٌ كُلُّ أُولَئِكَ كَانَ عَنْهُ مَسْئُولًا ﴿٦٦﴾

37. Hana u soconnin Dhulka kibir Illeen ma Jeexi Kartid Dhulka kumana gaadhaysid Buuraha dherare.

وَلَا تَمْشِ فِي الْأَرْضِ مَرَحًا إِنَّكَ لَن تَخْرِقَ الْأَرْضَ وَنَتَّبِعَ الْجِبَالَ طُولًا ﴿٦٧﴾

38. Dhammaan waxaasna Xumaantiisu Eebahaa Agtiisa waa lagu Neceb yahay.

كُلُّ ذَلِكَ كَانَ سَيِّئُهُ عِنْدَ رَبِّكَ مَكْرُوهًا ﴿٦٨﴾

Zinadu waa dulli, Xaaraan iyo Halaag, waana in laga fogaado, Illeen Danbi ka wayn Zino gaalnimo mooyee ma Jiree, Sida Nabigu yidhi, Sidoo kale waa inaan xaq darro Naf lagu Dilin. Sunan waxaa ku sugnaaday (Xadiith) Adduunkoo rogmada yaa ka fudud Eebe agtiisa naf Muslim ah dilkeed. Cidda waliga u ah Ruuxa la dilana yuusan ku xadgubin Qisaasta, Illeen waa loo gargaaraye, Xoolaha agoontana waa inaan loogu Dhawaanin waxaan wanaag ahayn intay ka xoogaayaan illeen Cuniddoodu waa Naare, Waana in Ballanka la oofiyo, illeen waa lays warsane, Kaylka beegidda iyo miisaankana la oofiya si Fiican oo toosanna loo Sameeyaa illeen saasaa fiican oo Cidhib roone, waana inaan la sheegin Waxaan loo cilmi lahayn, illeen Maqalka, Araga iyo Qalbigaba waa lays warsane, Tan kale waa inaan dhulka, Eebe isla wayni iyo kibir lagu Soconin, Maxaa faa'iida ah oo ku jira mar hadaadan Dhulka duleelinayn Ama buuraha dherer ku gaarayn, illeen Miskiin baa tahay hays dhibin Si habsanna u soco, waadna u jeedaa Aayadahan waxa ku sugan waxaase Loo baahan yahay in la raaco dardaaranka. Al-Israa' (32-38).

39. Arrrintaasu waa waxa Eebahaa kuu waxyooday oo xigmada, hana yeelin Eebe la jirkiisa Ilaah kale oo lagugu tuuro Jahannamo adoo lagu dagaalay oo lagu fogeeyey.

ذَلِكَ مِمَّا أَوْحَىٰ إِلَيْكَ رَبُّكَ مِنَ الْحِكْمَةِ وَلَا تَجْعَلْ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ فَتَأْتِي فِي حُجَّتِهِمْ مَلُومًا مَدْحُورًا ﴿٦٩﴾

40. ma wuxuu idiin doortay Eebihiin Wiilal oos ka yeeshay Malaa'igta gabdho idinku waxaad ku hadlaysaan hadal wayn.

أَفَأَصْفَقَدُمْ رَبُّكُمْ بِالْبَيِّنَاتِ وَالنُّحُودِ مِنَ الْمَلَائِكَةِ إِنَّا نُنَادِيكُمْ لَتَقُولُونَ قَوْلًا عَظِيمًا ﴿٧٠﴾

41. dhab ahaan waan ku caddaynay (gagadinnay) Quraankan (wax badan) inay waantoobaan umase kordhin waaxaan carar ahayn.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَا فِي هَذَا الْقُرْآنِ لِيَذَّكَّرُوا وَمَا يَزِيدُهُمْ إِلَّا نُفُورًا ﴿٧١﴾

42. waxaad dhahdaa hadduu la jiro Eebe Ilaah kale siday sheegi waxay ka dooni lahaayeen Eebaha Carshiga leh jid (Cibaado ama la mid noqosho).

قُلْ لَوْ كُنَّا مُعَذِّبِينَ لَمَا إِلَهًا كَمَا يَقُولُونَ إِذًا لَنَبْعَثُنَّ إِلَهًا ذِي الْعَرْشِ سَبِيحًا ﴿٧٢﴾

43. Eebaa ka Nasahan Kana Sarreeya waxay sheegi sarrayn wayn.

سُبْحٰنَهُ وَوَعَالِ عِمَّا يُقُولُونَ غُلُوًا كَبِيرًا ﴿٧٣﴾

44. waxaa u tasbiixsada (Qaddariya) سُبْحٰنَهُ الْسَّمٰوٰتِ السَّبْعِ وَالْاَرْضِ وَمَنْ فِيهِنَّ اِنَّ مِنْ شَيْءٍ

Eebe Samooyinka todobada ah iyo Dhulka iyo waxa u dhexeeya, waxaan Eebe u Tasbiixsanayn ama ku mahdinaayna ma jiro, waydaanse garanayn tasbiixdooda, Eebana waa dulsame dambi dhaafa.

إِلَّا لِنَسِيحٍ بِحَمْدِهِ وَلَكِنْ لَأَنْفَقَهُمْ نَسِيحَهُمْ إِنَّهُ
كَانَ حَلِيمًا عَفُورًا ﴿٤٥﴾

Waxaas wanaagsan ee Eebe faray iyo waxyaalaha xun ee uu Reebay waa waxa Eebe u waxyooday Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) tan kale waa inaan Ilaahay cid kale lala caabudin wuxuu mudanyahayna la siinin, oo ciddii saas yeeshaa lagu tuuri Jahannamo isagoo la dagaalay oo la fogeeyey, Eebana uma doorin gaalada Wiilal isna Malaa'igta Gabdho kama yeelan waa hadal gafa oo wayn oo gaaladu dhahaan, Quraankana Eebe wax badan buu ku caddeeyey kuna soo celceliyey xaqa in Dadku wacdoomo, Daalimiintase waxaan carar ahayn uma siyaadin, Eebana waa kali hadday Ilaahyo kale la jiraan siday gaaladu sheegi waxay isku dayi lahaayeen inay Awoodda Eebe oo kale yeeshaan, ama haddii kale Eebaha xaqa ah caabudaan iyana, Eebana waa ka nasahanyahay oo ka sarceeyaa waxay sheegi, waxaaba u tasbiixsada Toddobada Samo iyo Dhulka iyo waxa ku sugan, wax kastana wuxuu u tasbiixsadaa kuna mahdiyaa Eebe mase la kasayo tasbiixdooda, cebana waa dulsame dambi dhaafa, la yaabna ma leh in wax walba Eebe weyneeyo xusana illeen isagaa Awood leh oo ahaysiiyey Anas wuxuu sheegay in Rasuuku (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u galay Dad Gaadiid saran oo la taagan, kuna kor sheekaysan, markaasuu ku yidhi Rasuulku (Kora iyadoo Nabad qabta oo daaya iyadoo Nabad qabta, hana uga yeelanina sheekadiinna Waddooyinka iyo Suuqa kuraas (oo kale) maxay jirtaa mid la korsanyahay oo ka khayr roon kan korsan Eebana ka xusid badan. (Imaam Axmed) Eebaana Awood leh. Al-Israa' (39-44).

45. markaad Akhriyi Quraanka waxaan yeellaa dhexdaada iyo dhexda kuwaan rumeynin Aakhiro xijaab (dayr) asturan.

وَإِذَا قَرَأْتَ الْقُرْآنَ فَجَعَلْنَا بَيْنَكَ وَبَيْنَ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ
بِالْآخِرَةِ حِجَابًا مَسْجُورًا ﴿٤٥﴾

46. waxaana yeellay Quluubtooda dabool inay kasaan Quraanka, dhagohoodana culays, markaad ku xusto Eebahaana Quraanka kaligiis waxay u jeedsadaan Gadaal iyagoo carari.

وَجَعَلْنَا عَلَى قُلُوبِهِمْ أَكِنَّةً أَنْ يَفْقَهُوهُ وَفِي آذَانِهِمْ وَقْرًا
وَإِذَا ذَكَرْتَ رَبَّكَ فِي الْقُرْآنِ وَحْدَهُ وَكُنَّا عَلَى
أَذْرَانِهِمْ نُنْفَرُوا ﴿٤٦﴾

47. annagaa og waxay dhagaysan markay ku dhagaysan adiga iyagoo faqi markay dhihi Daalimiintu Waxaan Ninsixran ahayn ma Raacaysaan.

نَحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَسْتَمِعُونَ بِهِ إِذْ يَسْتَمِعُونَ إِلَيْكَ
وَإِذْ هُمْ يُخْفُونَ إِذْ يَقُولُ الظَّالِمُونَ إِنَّا تَعَتَّبُونَ
إِلَّا رَجُلًا
مَسْحُورًا ﴿٤٧﴾

48. Day siday kuugu yeelaan tusaalayaal oy U dhumeen oyna u Karin jidka Hanuunka.

أَنْظُرْ كَيْفَ ضَرَبُوا لَكَ الْأَمْثَالَ فَضَلُّوا فَلَا يَسْتَطِيعُونَ
سَبِيلًا ﴿٤٨﴾

49. Waxay dhaheen (gaaladii) ma mar-

وَقَالُوا إِذْ أَكْثَرْنَا أَوْ قُنَاتًا إِنَّا لَتَجْمَعُونَ

kaan Noqonno lafo iyo burbur yaa nalagu soo celin Abuur cusub.

﴿حَلَقًا جَدِيدًا ١٤﴾

50. waxaad dhahdaa noqda dhagax ama bir.

﴿قُلْ كُونُوا حِجَارَةً أَوْ حَدِيدًا ١٥﴾

51. ama khalqi (Abuur) ku wayn laabtiinna, waxayna dhihi yaa na soo celin, ku dheh Eebihii idin abuuray markii hore, waxayna kuu gilgili mada-xooda iyagoo leh waa goorma isagu, waxaad dhahdaa waxaa suurowda inay dhawdahay.

﴿أَوْ خَلَقْنَا مِمَّا يَكْتُمُونَ فِي صُدُورِهِمْ فَمَسْفُورُونَ
مَنْ يُعِيدُنَا قُلِ الَّذِي فَطَرَكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ فَسَيُنْغِضُونَ
إِلَيْكُمْ رُءُوسَهُمْ وَيَقُولُونَ مَتَى هُوَ قُلْ عَسَى أَنْ يَكُونَ
قَرِيبًا ١٦﴾

52. waana maalintuu idiin yeedhi Eebe ood maqlaysaan isagoo mudan Mahad una malaynaysaan inaydaan nagaannin wax yar mooyee.

﴿يَوْمَ يَدْعُوكُمْ فَتَسْتَجِيبُونَ بِحَمْدِهِ وَتَظُنُّونَ إِن
لِئِنَّكُمْ إِِلَاقِيكُلَا ١٧﴾

Gaaladu xaqa iyo Quraanka way ka madax adaygi oo xijaabaa ka xiga xaggiisa, Qulubtooduna way daboolantahay, mana fahminayso Quraanka, Eebe kaliya marka la sheegana way cararaan iyagoo dooni in waxyaalo kale lala sheego, Eebaa og waxay dhagaysan iyo markay faqi, sheegina Daalimiintu in Nabigu yahay Nin sixran waxyaalo tusaalooyin ahna way u yeeleen, waxayse ka dhumeen xaqii iyo Jidkii, mana karaan unoqosho xaq, waxayna diidaan in la soo bixin iyagoo lafo iyo burbur Noqday, waxay doonise ha noqdeen ama dhagax ama Bir ama sida Cirka iyo wixii la mida, waxaa uun idin soo celin Eebihii markii hore idin Abuuray, waxayna madaxa la ruxaan kibir iyo isla wayni iyagoo warsan goortuu dhici xaalku, waxaase suurowda inuu dhawyahay, maalintase Eebe ugu yeedhi kulanka Qiyaame way maqli iyagoo Amaani una malaayn inayna ku nagaanin Adduunkii wax yar mooyee, wana kaas Quraankii, Nabigii, siday Gaalo u diideen, siday u dhagreen, siday soo bixinta u diideen, Eebaase soo celin Qiyaamana wataas, madax ruxii, isla waynidii iyo xaq diidna waxaa ka dambayn khaasaare iyo lugooyo. Akhri Qisada Abuu sufyaan, Abuu jahal iyo Akhras iyo siday u dhagaysteen Quraanka iyagoo kala gaban iyo siday isu warsadeen iyo hadalkii xumaa ee Abuu Jahal, xaqiibaase hadhay xumaana tagtay. Al-Israa' (45-52).

53. waxaad ku dhahdaa Addoomadayda ha dheheen sida u fiican, Shaydaan-ku wuu fasaadin dhexdiinnee, Shaydaanna Dadka col cadbuu u yahay.

﴿قُلْ لِعِبَادِي يَقُولُوا الَّتِي هِيَ أَحْسَنُ إِنَّ السَّيِّطَانَ
يَنْزِعُ بَيْنَهُمْ وَإِنَّ السَّيِّطَانَ كَانَ لِلْإِنْسَانِ
عَدُوًّا مُّبِينًا ١٨﴾

54. Eebihiiinaa idin og (waxaad tihiin) hadduu doono wuu idiin Naxariisan, hadduu doonana wuu idin Cadaabi, kuugumana aanaan dirin inaad wakiil (Ilaaliye u Noqoto).

﴿رَبُّكُمْ أَعْلَمُ بِكُمْ إِنَّ يَشَاءُ يَحْمَلْكُمْ أَوْ لَنْ يَشَاءَ
يُعَذِّبْكُمْ وَمَا أَرْسَلْنَاكَ عَلَيْهِمْ وَكِيلاً ١٩﴾

55. Eebahaana waa ogyahay waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka, dhab

﴿وَرَبُّكَ أَعْلَمُ بِمَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَقَدْ

ahaan baana ugu fadilnay Nabiyada Qaarkood qaarka (kale) waxaana Siinay Nabi Daawuud Zabuur.

فَصَلَّاتَنَا بَعْضَ النَّبِيِّينَ عَلَى بَعْضٍ وَأَتَيْنَا
دَاوُدَ زَبُورًا ﴿٥٦﴾

56. waxaad dhahdaa u yeedha kuwaad sheegateen oo Eebe ka soo hadhay ma hantaan inay idinka faydaan dhib ama idinka wareejiyaan.

قُلْ أَدْعُوا الَّذِينَ رَزَعْتُمْ مِنْ دُونِهِ فَلَا يَمْلِكُونَ
كَشْفَ الضَّرِّ عَنْكُمْ وَلَا تَحْوِيلًا ﴿٥٦﴾

57. kuwaas ay caabudina iyagaaba ka dooni xagga Eebe u dhawaansho iyo kusii dhawaansho waxayna Rajayn Naxariistiisa, wayna ka cabsan cadaabkiisa, cadaabka Eebana waa wax laga digtoonaado.

أُولَئِكَ الَّذِينَ يَدْعُونَ يَبْتَغُونَ إِلَى رَبِّهِمُ الْوَسِيلَةَ
أَيْهُمْ أَقْرَبُ وَيَرْجُونَ رَحْمَتَهُ وَيَخَافُونَ عَذَابَهُ يُؤْنَسُ
عَذَابَ رَبِّكَ كَانَ مَحْذُورًا ﴿٥٧﴾

Eebana wuxuu faray Addoomadiisa inay wanaag ku hadlaan, illeen Shaydaanku Dadka dhexdiisu fasaadiyaaye, waana Colka Dadkee, Eebana waa ogyahay xaalka Dadka, Naxariis iyo Ciqaabba isagaa hanta, Nabigana waxaa loo diray gaadhsiinta xaqa, ee looma soo dirin inuu wakiil ka noqdo Dadka, Eebana wuu ogyahay waxa ku sugan Cirka iyo Dhulka, wuxuuna kala fadilay Nabiyada, Nabi Daawuudna wuxuu siiyey Kitaabkii Zabuur ahaa, wax Eebe ka soo hadhay oo dhib faydi kara ama wareecin karana ma jiro, kuwa ay wax ka dayi ee ay baryi Naftoodaa Eebe u dhawaansho dooni oo Masaakiina 'Naxariistiisana rajayn kana cabsan cadaabkiisa, illeen cadaabka eebe waa laga digay waana wax laga digtoonaado, taasina waxay Muujin inay waajib tahay in hadal fiican lagu hadlo, in Shaydaan laga digtoonaado, in Naxariista Eebe lagu dadaalo heliddeeda iyo in laga digtoonaado cadaabkiisa (Eebaa laga magan galaaye). Al-Israa' (53-57).

58. Qaryo (Magaalo) Aanaan halaa-gayn ma jirto ka hor Qiyaamada ama aan la cadaabayn (Ciqaabayn) cadaab daran waana arrin ku qoran Kitaabka (Looxul Maxfuudka).

وَأَنْ تَنْزِيلُ الْكِتَابِ لَنْ يَكُونَ إِلَّا نَذِيرًا لِقَوْمٍ
أُولُوا قُلُوبًا سَاهِيَةً ﴿٥٨﴾

59. Umana aanaan daynin soo diridda Aayado (Mucjiso) inay beeniyeen kuwii hore mooyee, waxaana siinnay Thamuud Hashii oo wax tusisa wayna ku dulmi faleen (ka gaaloobeen) Aayadaha waxaan Cabsi galin ahayn uma soo dirro (Dejinno).

وَمَا مَعَنَا أَنْ نُرْسِلَ بِالْآيَاتِ إِلَّا أَنْ كَذَّبَ بِهَا
الَّذِينَ كَفَرُوا وَعَتَيْنَا سُورَاتٍ مَبِينَةٍ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ
وَمَا نُرْسِلُ بِالْآيَاتِ إِلَّا تَحْوِيلًا ﴿٥٩﴾

60. (Xusuuso) markaan kugu nidhi Eebahaa wuxuu koobaa Dadka, kamaana aanaan yeelin Riyadaan ku tusinay fidmada Dadka mooyee (Imtixaan) iyo Geedka lagu lacnaday Quraanka, waanu ku cabsiin umana siyaadiyo waxaan

وَأَذَقْنَا لِكُلِّ لِقَاءِ رَبِّكَ أَحْسَبًا بِالْبُنْيَانِ وَمَا جَعَلْنَا
الرُّءْيَا إِلَّا نَذِيرًا لِقَوْمٍ يُدْعُونَ إِلَى الْفِتْنَةِ أُولَئِكَ
سَوَاءٌ لَكَ فِي الْقُرْآنِ وَتَحْوِيلًا فَمَا يَرْجُونَ إِلَّا
طُغْيَانًا كَبِيرًا ﴿٦٠﴾

xadgudub wayn ahayn.

61. (Xusuuso) markaan ku nidhi Malaa'igta u Sujuuda Aadan oy Sujuudeen Iblis moyee, oo yidhi ma waxaan u sujuudi waxaad Abuurtay isagoo dhooba ah,

وَأَذْنُكَ لِلْمَلَائِكَةِ آسَجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا
إِبْلِيسَ قَالَ أَأَسْجُدُ لِمَنْ خَلَقْتَ طِينًا ﴿٦١﴾

62. wuxuuna yidhi ka warran kan aad iga sharriftay, haddaad dib ii dhigto tan iyo Qiyaamada waxaan ka adkaan (Dhumin) Faraciisa wax yar mooyee.

قَالَ أَرَأَيْتَكَ هَذَا الَّذِي كَرَّمْتَ عَلَيَّ لَئِنِ أَخَّرْتَنِي
إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ لَأَخْتَنِكَ بِمَا خَرَّكَ بِئْسَ الْوَعْدُ لِلْعٰلَمِينَ
قَلِيلًا ﴿٦٢﴾

Magaalo kasta waaxaa u dambeeya halaag Qiyaamada ka hor ama ciqaab daran, waana xaal ku qoran Luuxul Maxfuudka, Eebana wuxuu u daayey soo Dejinta Mucjisdaha waxaa Beeniyey kuwii hore, waxaana kamid ahaa Hashii Reer Thamuud loo soo bixiyey ee ku tusinaysay Awoodda Eebe, wayna ka Gaalooheen. Waxayna Gaaladii Makaad warsadeen Nabiga waxyaalo ay ku dhibayeen sida in buuraha Dahab looga dhigo, iyo Togog loo jeexo iyo waxyaalo kale, Mucjisdana Eebe wuxuu u soo dejiyaa Cabsiin.

Riyadu Nabigu arkay iyo Geedka lagu Lacnaday Quraankana waa Imtixaan, Eebana wuu koobay Dadka, wuuna cabsiin badankoodse way xadgudbaan oo fasaadka badiyaan. Qisada Sujuudda Malaa'igta iyo diidada Iblisna waxaa lagu sheegay Toddobo Suuradood, waxaase loo baahan yahay in lagu waano qaato, ibliisna laga digtoonaado, xaqana lagu tooso. Al-Israa' (58-62).

63. Eebe wuxuu ku yidhi: Tag ciddii ku raacda oo ka midana Jahannamaa Jasiihiisu yahay abaal marin dhamaystiran.

قَالَ أَذْهَبَ فَمَنْ يَبْعَكَ مِنْهُمْ فَإِنَّ جَهَنَّمَ جَزَأُكُمْ
جَزَاءً مَوْجُودًا ﴿٦٣﴾

64. ku duufso cidaad karto oo ka mida codkaaga kuna soo Jiido fardahaaga iyo lugtaada lana wadaag xoolaha iyo Carruurta una yabooh, mana yabooho shaydaan waxaan dhagar ahayn (iyo Baadi).

وَأَسْتَفْزِرُ مِنْهُمْ مَنْ أَسْطَعَمَتْ مِنْهُمْ بَصُوتِكَ وَأَجَلِبَتْ
عَلَيْهِمْ مَخِيلَتِكَ وَرَجَلِكَ وَشَارِكُهُمْ فِي الْأَمْوَالِ
وَالْأَوْلَادِ وَعَدَّهُمْ وَمَا يَعِدُهُمُ الشَّيْطَانُ إِلَّا
عُرُورًا ﴿٦٤﴾

65. Addoomadayda kuma lihid xujo, Eebahooda waa ku filan yahay wakiil (Ilaaliye).

إِنَّ عِبَادِي لَيْسَ لَكَ عَلَيْهِمْ سُلْطٰنٌ وَكَفَى
بِرَبِّكَ وَكِيلًا ﴿٦٥﴾

66. Eebihii waa kan idinku wada doonta (Markabka) Badda dhaxdeeda inaad doonataan Fadligiisa (Risqi) Eebana waa idiin Naxariiste.

رَبِّكُمْ الَّذِي يُرِيكُمْ الْفُلْكَ فِي الْبَحْرِ لِتَبْتَغُوا
مِنْ فَضْلِهِ إِنَّهُ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا ﴿٦٦﴾

67. markuu idinku taabto badda dhibna wuu dhumaa waxaad baryeyseen Eebe mooyee, markuu idiin soo koriyo Bar-

وَأَذَانَكُمْ الضَّرُّ فِي الْبَحْرِ ضَلَّ مَنْ تَدْعُونَ إِلَّا إِلٰهًا
فَلَمَّا تَجَدَّكُمْ إِلَى الْبَرِّ أَعْرَضْتُمْ وَكَانَ الْإِنْسٰنُ

rigana waad jeedsataan Dadkuna waa Gaalnimo badane.

كُفُورًا ﴿٦٧﴾

Eebe wuxuu ugu Jawaabay tag adiga iyo inta ku raacda naarta Jahannamaa abaal loo dhameeyey looga dhigiye, kuna duufso ciddaad karto codkaaga oo Hees, Durbaan iyo Cid kastoo xumaan u yeedhi, kuna kaxayso fardahaaga iyo Lugtaada lana wadaag xoolaha iyo Carruurta, wuxuu yidhi Ibnu Cabbaas: xoolo la wadaagiddu waa xumaanta ay ku bixiyaan, Xasan Basrina wuxuu yidhi: Waa kasabkeeda xaaraan iyo ku bixin dambi, la wadaagidda Carruurtana waa Dayiciddooda iyo xumayn akhalaadooda siduu yidhi Xasan Basri, waa gaalaynta iyo Islaamka ka bixinta, yabooha shaydaanna waa lugooyo, addoomada eebe ee fiicanse xujo kuma leh, Eebaana Wakiil ku filan, Nicmooyinkiisa waxaa ka mida inuu Badda u sahlay dadka kuna maraan Markab iyagoo fadliga iyo Risqiga Eebe raadsan. Waana u Naxariistaa ummaddiisa, markuu dhib ku taabto baddana waxay halmaamaan wax kastooy Baryayeen oo Eebe ka soo hadhay, markay Barriga tagaanna way jeedsadaan, Dadkuna waa Gaalnimo badan yahay. Saas Darteed waa in laga digtoonaado Shaydaan iyo Jidkiisa, waa in xoolaha iyo carruurta xumaan laga dhawraa, Nicmooyinka Eebana lagu Mahdiyaa. Al-Israa' (63-67).

68. Miyaad ka Aamin Noqoteen in Eebe idinla Gooyo dhinac Dhulka ka mida, ama idinku soo diro Dabayl daran markaas aydaan helin Wakiil.

أَفَأَمْسِرُ أَنْ يَخْصِفَ بِكُمْ جَانِبَ الْبَرِّ أَوْ يُرْسِلَ عَلَيْكُمْ حَاصِبًا ثُمَّ لَا يَجِدُوا لَكُمْ وَكَيْلًا ﴿٦٨﴾

69. Miyaadse ka Aamin Noqoteen inuu idinku celiyo (Badda) mar kale oos idinku diro Dabayl (wax jajabisa) oos idin Maansheeyo gaalnimadiinna darted, markaas aydaan u helin wax noo raacda.

أَمْ أَمْسِرُ أَنْ يُعِيدَ كُفْرًا فِيهِ تَارَةً أُخْرَى فَيُرْسِلَ عَلَيْكُمْ قَاصِفًا مِنَ الرِّيحِ فَيُغْرِقَكُم بِمَا كُفَرْتُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا لَكُمْ عَلَيْهِمْ تَبِعًا ﴿٦٩﴾

70. dhabbaanu u sharrifnay Binii Aadamaka waxaana ku xambaarray Bar-riga iyo Baddaba waxaana ku arsaaqnay wanaag, waxaana ka fadil-nay wax badan oo ka mida waxaan Abuurray fadilaad.

﴿٧٠﴾ وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ وَجَعَلْنَا فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ رِجًا وَرَزَقْنَاهُمْ مِنْ الطَّيِّبَاتِ وَفَضَّلْنَاهُمْ عَلَى كَثِيرٍ مِمَّنْ خَلَقْنَا تَفْضِيلًا ﴿٧٠﴾

71. (xusuuso) Maalintaan cid walba ugu yeedhayno Imaamkeeda «Quraanka ama Nabiga», ciddiise laga siiyo Kitaabkiisa Midigta kuwaasi way akhrin Kitaabkooda lagamana dulmiyo xuub laf timireed.

يَوْمَ نَدْعُوا كُلَّ أُنثَىٰ بِمَا امْتَدَّتْ مِنْ أَوْقِي كَتَبَتِهُ بِيسمينه. فَأُولَٰئِكَ يَبْقَوْنَ وَأَكْثُهُمْ وَلَا يَنْظَلُمُونَ ﴿٧١﴾

72. cidiise Adduunka ku indho la' (xaqa diida) aakharana wuu indho la'aan oo ka dhumi Jidka.

وَمَنْ كَانَ فِي هَذِهِ أَعْمَىٰ فَهُوَ فِي الْآخِرَةِ أَعْمَىٰ وَأَضَلُّ سَبِيلًا ﴿٧٢﴾

Cidna kama aamin aha Ciqaabta Eebe ama dhulka ha la Gooyo ama Badda ha ku Maansheeyo iyo sidii kasta oo uu doono, wax ka daba kicina ma jiro, Eebana wuu sharrifay Banii Aadamka, Caqliga, Abuurka, Maqalka, Aragga, iyo wax yaale kale, wuxuuna u fududeeyey ku safarka iyo ku socodka Barriga iyo Badda, kuna Arsaaqay wanaag, kana fadilay wax badan oo khalqiigiisa ah, cid walbana wuxuu Eebe ugu yeedhi Qiyaamada ama Nabigceedii ha Noqdo ama Kitaabkii loo soo Dejiyey iyo camalkiisii, ciddase Liibaani waa midda Kitaabkeeda Midigta laga siin oo akhrin iyagoo ku faraxsan oon la dhibaataayn, ciddiise xaqa ka indho la'ayd Adduunka oo ka leexatay Nuurka Eebe Aakharana way sii indho Beeli oo khasaari, illeen horay bay xaqa uga soo indho beeshaye. Taasina waxay adkayn in Eebe laga digtoonaado, in Qurranka iyo Nabiga Imaama laga yeesho, in xaqa lagu dadaalo si aan loo Dhumin loogana indho beelin Adduun iyo Aakhiraba, Eebana Hanuun la warsado. Al-Israa' (68-72).

73. Waxay u dhawaadeen Gaaladii inay kaa Fidmeeyaan waxaan kuu waxyoonaay inaad Nagu been abuuratid wax kale, Markaas ay kaa Yeeshaan Saaxiib.

وَأَن كَادُوا لَيَفْتِنُونَكَ عَنِ الَّذِي أُوتِيتَ إِلَيْكَ
لَيَفْتِنَنَّا عَلَيْكَ عَذَابٌ وَإِذَا لَا أَتَّخِذُكَ خَلِيلًا ﴿٧٣﴾

74. Hadaanan ku sugin waxaad u dhawaan lahayd inaad u iilato xagooda wax yar.

وَلَوْلَا أَن مَّكَّنَّاكَ لَفَدَاكَ تَرَكَهُمُ سَيِّئًا
قَلِيلًا ﴿٧٤﴾

75. Markaasaan ku dhadhansiin lahayn (Cadaab) Labanlaaban nolosha Adduun iyo Mid labanlaaban Geerida Manahesheen gargaare.

إِذَا لَأَذِّنَاكَ لِصُغْفُورٍ أَلْحِيوَةٌ وَضَعْفُ الْمَمَاتِ مُرَدًّا
تَجِدُكَ عَلَيْهَاَصِيرًا ﴿٧٥﴾

76. Waxayna u dhawaadeen inay kaa argagixiyaan Dhulka inay kaa bixiyaan Markaas oyna nagaadeen Gadaashaada wax yar Mooyee.

وَأَن كَادُوا لَيَسْتَفِزُّوكَ مِنَ الْأَرْضِ لِيُخْرِجُوكَ
مِنْهَا وَإِذَا لَا يَلْبَسُونَ خِلْفَكَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٧٦﴾

77. Waana sunnada Rasuuladaan dir-ray Hortaa, una heli maysid Sunnadanada Wax dooriya (Leexin).

سِتَّةَ مَن قَدْ أَرْسَلْنَا قَبْلَكَ مِنْ رُسُلِنَا وَلَا تَجِدُ
لِسُنَّتِنَا تَحْوِيلًا ﴿٧٧﴾

Eebe wuxuu ka warramay siduu ugu Gargaaray Nabigiisa, una Sugayay Inkastoy Gaaladii isku dayeen inay Xaqa ka leexiyaan waxay Rabaanna uu yeelo, Ciddii Muslim ah ee xaqa uga leexata Gaalada darteedna si Ay Saaxiib ula noqdaan waa mid Halaag iyo Khasaare ku danbayn iyo Ciqaab adduun iyo mid Aakhiraba, Waxayna Gaaladu had iyo Jeer isku Dayi in Muslimiintu u soo dhawaadaan, Waase dulli Adduun iyo mid Aakhiro iyo Gargaarid la'aan, Gaaladiina waxay isku dayeen inay Nabiga (Naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka saaraan Dhulka miyayse kaga danbayn wax yar mooyee, Saasayna u dhacday arrintii, Waana sunnada Eebe ee uu ku falay kuwuu horay u diray, Wax baddali karana ma jiro, Dadka wanaagsan la noolidooda waa tan fiican, Markase Dhulka ka madho wanaag iyo dadkiis waa uun halaag, Ciqaab iyo Khasare sida dhacda.

Aayaduhuna waxay adkayn: Ku sugnaan xaqa, Ka digtoonida u dhawaansho iyo la saaxiibidda gaalada, Ka digtoonida in dadka fiican Dhulka laga Eryo (ama ha ku soo degto reer makaad ama yuhuud waa Arrin guud oo caama). Al-Israa' (73-77).

78. Oog salaadda markay Qorraxdu suusho Ilaa madawga habeenka iyo

أَقْرَبِ الصَّلَاةِ لِلرُّؤُوفِ الشَّمْسِ إِلَى عَسَقِ آتِلٍ

Quraanka (Salaada) waabariga (sub-axa) Quraanka waabariguna waa mid la Joogee (Malaa'igta).

وَقُرْءَانَ الْفَجْرِ إِنَّ قُرْءَانَ الْفَجْرِ كَاتٍ
مَشْهُودًا ﴿٧٨﴾

79. Habeenkana Tahajud (Qaar tuko) isagoo Dheeraad kuu ah, Waxay u dhawdahay In Eebahaa kuu soo bixiyo maqaaam la Mahadiyo (Shafeecada).

وَمِنَ اللَّيْلِ فَتَهَجَّدْ بِهِ نَافِلَةً لَكَ عَسَىٰ أَنْ يَبْعَثَكَ
رَبُّكَ مَقَامًا مَّحْمُودًا ﴿٧٩﴾

80. Waxaad dhahdaa Eebow i gali Meel galid run ah, ina bixi bixin runa, iigana Yeel agtaada Xujo gargaara.

وَقُلْ رَبِّ أَدْخِلْنِي مَدْخَلَ صِدْقٍ وَأَخْرِجْنِي مَخْرَجَ
صِدْقٍ وَأَجْعَلْ لِي مِنْ لَدُنْكَ سُلْطَانًا نَصِيرًا ﴿٨٠﴾

81. Waxaad dhahdaa waxaa yimid Xaqii Waxaana tirtirmay Baadhilkii, Baadhilkiina Wuxuu noqday mid la tirtiro.

وَقُلْ جَاءَ الْحَقُّ وَرَهَقَ الْبَاطِلُ إِنَّ الْبَاطِلَ كَانَ زَهُوقًا ﴿٨١﴾

82. Waxaana soo dajinaynaa Quraanka Isagoo caafimaad iyo Naxariis u ah Mu'miniinta, Daalimiintana uma siyaa-diyo Waxaan Khasare ahayn.

وَنُزِّلَ مِنَ الْقُرْءَانِ إِنْ مَاهُوَ شِفَاءٌ وَرَحْمَةٌ لِّلْمُؤْمِنِينَ
وَلَا يَرِيدُ الْقَلِيلِينَ إِلَّا الْخَسَارًا ﴿٨٢﴾

Aayaddu waxay sheegtay waqtiyada salaadda laga Billaabo Duhurkii ilaa Subaxa, Inkastoo Xadiithyo badan cadeeyeen waqtiyadaas. Abu hurayrana Wuxuu nabiga ka wariyay (Naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) In salaadda subax Malaa'igta habeenka iyo tii Maalintii Xaadiiri (oo joogi) (Imaam axmed iyo kuwo kale yaa wariyay). Wuxuuna Eebe faray Nabiga Inuu si Dheeraada u tukado Habeenkii, inkastooy Cid walba Sunno u tahay Inuu tukado habeenkii, Hadana waxaa la sheegay inay nabiga Faral ku Ahayd Salaad u kicidda Habeenkii, Wuxuuna Eebe ugu bishaareeyay Nabiga Maqaam la mahadiyo, oo ah Shafeecada Qiyaamada marka Nabiyada la soo maro Dhibaataaduna darraato, Waryaa shafeecana la is warsado sida xadiithyo badan ku sugnaatay, waxaana ka mida: way laay idmi markaasaan dhihi wuxuu Eebe doono inaan dhaho, Waana Maqaamka la mahadiyay, (imaamu axmed), Wuxuuna Eebe Nabiga faray inuu warsado inuu meel fiicanna galiyo bixin Fiicanna bixiyo gargaarra siyo, illeen xaqiibaa yimide, Baadhilna wuu tirtirmaye, Quraankuna waa daawada iyo Naxariista Mu'miniinta iyo Khasaaraha Daalimiinta iyo gaalada, Ciddii raacdana waa u khayr tii ka leexatana waa u khasaare. Al-Israa' (78-82).

83. Markaan u nicmaynoo dadka wuu Jeedsadaa (xaqa ka fogaadaa) Haduu taabto dhibna wuu quustaa.

وَإِذَا أَعْمَنَّا عَلَى الْإِنْسَانِ أَعْرَضَ وَنَأَىٰ بِجَانِبِهِ
وَإِذَا مَسَّهُ الشَّرُّ كَانَ يَئُوسًا ﴿٨٣﴾

84. Waxaad dhahdaa cid kasta ha ku camal fasho jidkeeda (Diinteeda) Eebi-hiinbaa og Cidda jidkeedu hanuun badan yahaye.

فَلِكُلِّ يَعْْمَلُ عَلَىٰ شَاكِلِيهِ فَرِيضًا مَّا أَعْمَلُ بَيْنَ
هُوَ أَهْدَىٰ سَبِيلًا ﴿٨٤﴾

85. Waxay ku warsan Ruuxda, dheh

وَيَسْأَلُونَكَ عَنِ الرُّوحِ قُلِ الرُّوحُ مِنْ أَمْرِ رَبِّي وَمَا

ruuxdu waa Amarka Eebahay Cilmina
wax yarbaa la idin siiyay.

أَوَيْسُرْمِنَ الْعِلْمِ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٨٥﴾

86. Haddaan doonno waanu la tagi
kaan kuu Waxyoonay (Quraanka) mar-
kaasna uma helay sid Korkannaga wa-
kiil (gargaare).

وَلَيْنَ شَيْئًا تَدْعُهُنَّ بِالَّذِي أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ فَتُؤْتَيْنَهُنَّ لَكِ
بِهِ عَالِيَةً وَكَيْلًا ﴿٨٦﴾

87. Naxariista Eebahaa Mooyee illeen
fadligiisu Korakaaga waa ku wayn ya-
haye.

إِلَّا الرَّحْمَةَ مِن رَّبِّكَ إِنْ قَضَاهُ رَكَانَ عَلَيْكَ
كَيْدًا ﴿٨٧﴾

88. Waxaad dhahdaa hadday u kul-
maan Insi iyo Jinni inay la yimaadaan
Quraankan oo Kale lama imaan karaan
wax lamida Qaarkood qaar haba caa-
wiye.

قُلْ لَيْنَ اجْتَمَعَتِ الْإِنْسُ وَالْجِنُّ عَلَىٰ أَنْ يَأْتُوا بِمِثْلِ
هَذَا الْقُرْآنِ لَا يَأْتُونَ بِمِثْلِهِ وَلَوْ كَانَ بَعْضُهُمْ
لِبَعْضٍ ظَهِيرًا ﴿٨٨﴾

89. Dhabaan ugu Cadaynay dadka
Quraanka Tusaale kasta dadka badan-
kiise wuu diiday Gaalnimo mooyee.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَا لِلنَّاسِ فِي هَذَا الْقُرْآنِ مِنْ كُلِّ مَثَلٍ
فَأَيُّ أَكْثَرِ النَّاسِ إِلَّا كُفُورًا ﴿٨٩﴾

Dabeecada dadka Badankiis waxaa ka mida inuu kibro oo xaqa ka jeedsado Markuu Iadan yahay, markuu dhibtaabtaana quustaa oon rajayn inuu khayr heli, cid walbase ha ku socoto Wadkadeeda illeen Eebe wuu ogyahay cidda hanuunsan iyo tan kale wuuna abaal marine, Ruuxduna waa arrin amarka Eebe ah oosan cidna barin, ciddii warsatayna saasaa loogu jawaabay ama rec Makaad ha noqdeen ama Yuhuudu ha ku kaalmayse, Dadkana cilmigoodu waa yar yahay inkastooy qaar ismoodaan inay cilmi badan yihiin, Eebaa laga magan galay ee wuxuu caddeeyey in hadduu doono uu la tagi Quraanka cid u raacanna ayan jirin, Eebe Naxariistiisa mooyee oo fadliga Eebe Rasuulka siiyey waa wayn yahay, hadday Insi iyo Jinniba kulmaan inay Quraankoo kale keenaana ma keeni karaan haba isugu kaalmeyaan, Quraankaan Eebe wax badan yuu ku caddeeyey tusaale Dadka badankiise Diid waxaan gaalimo ahayn, Ceebayna ku tahay Dadka inay markay ladanyihiin xaqa ka jeedsadaan, dhibkana Quustaan, waxaan anfacyana warsadaan, illeen Eebaa Awood leh oo Quraanka soo Dejiyey, wax keeni wax ku soo dhawna ma jiro Insi iyo Jinni. Al-Israa' (83-89).

90. waxay dheheen Gaaladii (Makaad)
ku rumayn mayno intaad nooga jeexdo
Dhulka Ilo (Burqan).

وَقَالُوا لَنْ نُؤْمِنَ لَكَ حَتَّىٰ تَنْفَجُرَ لَنَا مِنَ
الْأَرْضِ يَنْبُوعًا ﴿٩٠﴾

91. ama kuu ahaan Beer Timir iyo
Cinaba ood ku sii dayso dhexdeeda
Wabiyo socda.

أَوْ تَكُونَ لَكَ جَنَّةٌ مِّنْ نَّجِيلٍ وَعِنَبٍ فَتُفَجِّرَ
الْأَنْهَارَ خِلَالَهَا تَفْجِيرًا ﴿٩١﴾

92. ama nagaga soo riddid Samada saad
sheegatay, Goosimo iyadoo ah, ama u
keentid Eebe iyo Malaa'igta si caddaa-
na.

أَوْ تُسْقِطَ السَّمَاءَ كَمَا رَعِمْتَ عَلَيْنَا كِسْفًا
أَوْ تَأْتِي بِنُورٍ وَالْمَلَائِكَةُ قِيْلًا ﴿٩٢﴾

93. ama kuu ahaado Guri dahaba ama ka kortid samada, kuuna rumayn mayno koriddaada intaad noogaga soo dejiisid kitaab aan Akhrinno, waxaad dhahdaa Eebahaybaa Nasahane ma waxaan bashar (Dad) Rasuula ahayn baan ahay.

أَوْ يَكُونُ لَكَ بَيْتٌ مِنْ زُخْرَفٍ أَوْ تَرْقَى فِي السَّمَاءِ وَلَنْ نُؤْمِنَ بِرُفُوقِكَ حَتَّى نُزِيلَ عَلَيْكَ كِتَابًا نَقَرُوهُ
فَلَوْ سَمِعْنَا رَبِّيَ هَلْ كُنْتُ إِلَّا بَشَرًا رَسُولًا ﴿١٣﴾

94. Dadka uma diidin inay Rumeeyaan markuu xaqu u yimid oon ahayn inay dhahaan ma wuxuu soo bixiyaa Eebe Bashar (Dad) ah Rasuullo.

وَمَا مَنَعَ النَّاسَ أَنْ يُؤْمِنُوا إِذْ جَاءَهُمْ الْهُدَىٰ إِلَّا أَنْ قَالُوا أَبَعَثَ اللَّهُ بَشَرًا رَسُولًا ﴿١٤﴾

95. waxaad dhahdaa hadday Dhulka yihiin Malaa'ig ku xasilloon (Degan) waxaan uga soo Dejin lahayn Samada Malag Rasuula.

فَلَوْ كَانَ فِي الْأَرْضِ مُلْكٌ مِثْلُكُمْ تُشْعُونَ مُظْمِئِينَ لَنُرْسِلُنَا عَلَيْهِمْ مِنَ السَّمَاءِ مَلَكًَا رَسُولًا ﴿١٥﴾

Gaalada iyo kuwa Caqliga yar waxay had iyo jeer Dadka ku Qiimeeyaan Xoolaha iyo wixii soo raaca, saas darded waxay u soo Jeediyeen Gaaladii Makaad Nabiga inuu Ilo Biyo ah u Jeexo, ama Beer Barwaaqo ah u ahaato, ama Cirka ku soodumiyo iyagoo sheegi in Nabigu saas ku yidhi, ama Guri Dahab ah u sugnaado, ama Cirka ka koro, ayan rumayneyn koriddiisa intuu waraqaq ay Akhristaan uga keeno, Eebaa Nasahan oo wayn, Nabigu ma waxaan Dad Eebe u waxyooday ahaynbaa. aadbay isula waynyihiin una Madax adkaayeen, Sharaftana xoolo, guryo, Beero iyo Biyo socda u moodeen, waxaase ka sarreysa Nabinimo, Quraan, Akhlaaq, Caddalad, Eebe Aqoonsi iyo Liibaan Aakhiro, hadday Malaa'igi degantahay Dhulka Eebe wuxuu usoo diri lahaa Malag Rasuula, Dadbaase degan marka waa in Dad la mida loo soo diro warka kalana layska dhaafto. Al-Israa' (90-95).

96. waxaad dhahdaa Eebaa ugu filan Marag dhexdeenna, isaguna waa ogaha arka Addoomadiisa.

فَلَقَدْ كَفَرَ بِاللَّهِ شَهِيدًا بَيْنِي وَبَيْنَكَ إِنَّهُ كَانَ بِعِبَادِهِ خَبِيرًا بَصِيرًا ﴿١٦﴾

97. cidduu Eebe Hanuuniyo umbaa hanuunsan, cidduu Dhumiyaana uma helaysid ugargaare Eebe ka soo hadhay, waxaana ku soo kulminaynaa Qiyaa-mada Wajigooda iyagoo Indho la'oo hadal la'oo Dhaga la', Hooygooduna waa Jahannamo, markastooy Dantana waxaan u siyaadinnaa Shidid (Hurin).

وَمَنْ يَهْدِ اللَّهُ فَهُوَ الْمُهْتَدِ وَمَنْ يُضِلِلْ فَلَنْ يَجِدَ لَهُمْ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِهِ وَيَحْشُرُهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ عَلَىٰ وُجُوهِهِمْ عُمِيًَّا وَيَوْمَئِذٍ نَسُوا مَا آوَتْهُمُ جَهَنَّمُ كَمَا خَبَتَ زُنُوبُهُمْ سَعِيرًا ﴿١٧﴾

98. taasina waa Abaalkooda ah inay ka gaalooheen Ayaadkanaga, oy dheheen markaan lafo noqonno iyo burbur miyaa nala soo bixin Abuur Cusub.

ذَٰلِكَ جَزَاءُ الْكٰفِرِ يَأْتُهُمُ كُفْرُهُمْ وَعَابَائِنَا وَأَقَالُوا آءَاءَ ذَاكَ عِظَامًا وَرُقَاتًا أَوْنًا لَمُبْعُورُونَ خَلْقًا جَدِيدًا ﴿١٨﴾

99. miyeyna ogayn Eebaha Abuuray Samooyinka iyo Dhulka inuu karo inuu Abuuro wax la mida iyaga, una yeelo muddo aan shaki lahayn, wayse diideen Daalimiintii Gaalimo mooyee (wax kale).

﴿أُولَئِكَ سَرُوا أَنَّ اللَّهَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ قَادِرٌ عَلَىٰ أَنْ يَخْلُقَ مِثْلَهُمْ وَجَعَلَ لَهُمْ أَجَلَ آرَابٍ فِيهِ قَائِلٌ الظَّالِمُونَ إِلَّا كُفُورًا ﴿٩٩﴾﴾

100. waxaad dhaahdaa idinku haddaad hanataan khasnadaha Naxariista Eebahay waad xajisan lahaydeen ka cabsi faqri, Dadku waa Bakhayl.

﴿قُلْ لَوْ أَنشَأَ تَعْلَمُونَ خِزْيَانِ رَحْمَةِ رَبِّي إِذَا لَأَمْسَكْتُمْ خَشْيَةَ الْإِنْفَاقِ وَكَانَ الْإِنْسَانُ قَسُورًا ﴿١٠٠﴾﴾

Eebaa marag ugu filan Runnimada Nabiga, wuxuuna ogyahay oo Arkaa Addoomadiisa, cidduu Hanuuniyo umbaa hanuunsan, tuu dhumiyana cid u gargaari ma jirto, waxaana loo soo kulmin kuwaas iyagoo Wajigooda ku socda illen Eebaha Lugahooda ku waday wuu karaa inuu ku wado Wajigoodee, siduu Nabigu yidhi, waxayna imaan iyagoon wax arkayn, hadlayna, waxna maqlayn, kuna hoyan Jahannamo markay dantaba la sii hurin, waana Abaalkooda illeen Aayaadka Eebay ka Gaaloobeene, waxayna diideen in Eebe soo bixin intay lafo iyo Burbur Noqdeen waxayse iloobeen in Eebaba Abuuray Cirka iyo Dhulka uu karo iyagoo kale Qiyaamada, una yeelay muddo dhaba, Gaalo iyo daalimiinse waxaan wumaan ku madax taag ahayn waa diideen, Eebaana hodana Dadkuse waa fuqaro hadday Khasnadaha Naxariista Eebe haystaanna way xajisan lahayeen iyagoo faqri ka yaabi illeen Dad waa Bakhayle. Al-Israa' (96-100).

101. waxaan dhab u siinnay (Nabi) Muuse sagaal Aayadood (Mucjiso) oo cad cad ee warso Binii Israa'iil markuu u yimid oo ku yidhi Fircoon waxaan kuu malayn Muusow mid la sixray.

﴿وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَىٰ تِسْعَ آيَاتٍ بَيِّنَاتٍ فَسْتَكْبَرَ ﴿١٠١﴾﴾
﴿بَنِي إِسْرَائِيلَ إِذْ جَاءَهُمْ فَقَالَ لَهُمْ فِرْعَوْنُ إِنِّي لَأَظُنُّكَ يَا مُوسَىٰ مَسْحُورًا ﴿١٠٢﴾﴾

102. wuxuuna yidhi (Nabi Muuse) waad ogtahay inuusan soo dejinin kuwaan waxaan Eebaha Samooyinka iyo Dhulka ahayn iyagoo xujooyin ah, anna waxaan kuu malayn Fircoonow mid la halaagi.

﴿قَالَ لَقَدْ عَلِمْتُمْ مَا أَنْزَلَ هَذِهِ لَكُمْ إِلَّا أَنْ رُبَّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ بِصَآئِرٍ وَإِنِّي لَأَظُنُّكَ يَا فِرْعَوْنُ مَجْهُورًا ﴿١٠٣﴾﴾

103. markaasuu doonay fircoon inuu ka kaxeeyo Dhulka markaasaan Maansheyay isagii iyo intii la jirtay dhammaan.

﴿فَأَرَادَ أَنْ يَنْتَفِرَ مِنْهُمْ رَبُّ الْأَرْضِ فَأَغْرَقْنَاهُ وَمَعَهُ جَمِيعًا ﴿١٠٤﴾﴾

104. waxaana ku nidhi gadaashiis Baniisraa'iil daga Dhulka, Markuu yimaaddo Yaboohii Dambana waannu idin keeni dhammaan.

﴿وَلَقَاتِنَا مِنْ بَدْوٍ مِثْلِيٍّ إِسْرَءِيلَ يَلْأَسْكُنُوا الْأَرْضَ فَإِذَا جَاءَهُ وَعَدُ الْآخِرَةِ جِثَا بِكُمْ لَقِيفًا ﴿١٠٥﴾﴾

105. xaq baanna ku soo dejinnay
Quraanka xaqbuuna ku soo degay,
waxaana ku dirray adoo Bishaareeye u
diga ah.

وَبِالْحَقِّ أَنْزَلْنَاهُ وَبِالْحَقِّ نَزَّلْ وَمَا أَرْسَلْنَاكَ
إِلَّا مُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿١٥﴾

106. waana Quraan oon u kala bixinnay
(soo dejintiisa) inaad ku ahkrido dadka
kaadsiinyo, waana soo dejinay soo dejin
Qaar Qaar ah.

وَقُرْءَانًا فَرَقْنَاهُ لِتَقْرَأَهُ عَلَى النَّاسِ عَلَى مُكْرٍ وَنَزَّلْنَاهُ
نَزِيلًا ﴿١٦﴾

Eebe wuxuu siiyey lana soo bixiyey Nabi Muuse Sagaal Mucjiso, oo kala ah sida Aayaddu sheegtay: Ushii, Gacantii, Abaartii, Baddii, Maanshayntii, Ayixii, Injirtii, Rihii iyo Dhiigii ama Nusqaantii midhaha, Banii Israa'iilla waa ogyihiin, Fircoonse wuxuu ugu Jawaabay inuu dhaho Muusob waxaan kuu malayn in lagu sixray, wayna is maleeyeen Fircoon iyo Nabi Muuse, waxaase rumoobay malihii Nabi Muuse oo yidhi waad ogtahay inuu Aayadahan soo Dejiyey Eebaha Cirka iyo dhulka isagoo xujooyin waano ah waxaana kuu malayn Fircoonow mid la halaagi, waana la halaagay markuu isku deyey inuu dhulka ka bixiyo oo la maansheeyey isagii iyo intii la jirtay, dhulkiina u hadheen oo dageen Banii Israa'iil inta yaboohii Eebe ee soo uruuriitooda laga gaadhi, Quraanka Eebaa xaq ku soo Dejiyey, Xaqbuuna ku soo degay Nabiguna wa Bishaareeye Diga, soo dejinta Quraankuna hal mar ma ahayn ee wuxuu soo degayey Saddex iyo labaatan sano; Saddex iyo Toban sano Maka ah iyo toban sanoo Madiina ah, si Dadka loogu akhriyo kaadsiinyo iyo inyar inyar, waana xigmadda iyo Naxariista Eebe illeen hadduu hal mar soo dego siday gaaladu codsadeen waan lagu dhibboon lahaa. Waxaase loo baahanyahay Raacidda Quraanka, ku dhaqankiisa, Barashadiisa, ugu yeedhiidiisa, si loo Liibaano, illeen waa xaqii Eebaheenna wayn soo dejiyaye. Al-Israa' (101-106).

107. waxaad dhahdaa rumeeya Quraan-
ka ama ha rumeynina kuwa la siiyey
cilmiga (kuwa fiican) marka lagu akh-
riyo korkooda waxay u dhacaan wajiga
iyagoo Sujuudi.

قُلْ إِنَّمَا أَدْعُوا رَبِّيَ وَلَا تَدْعُوا لِيَّ إِلَٰهَ إِلَّا الَّذِي رَزَقَنَا مِنْ قَبْلِهِ
إِذْ أَتَيْنَاهُ عَلَىٰ سَمْعٍ مَّجْمُومٍ لَّذَاقَانَ سُجَّدًا ﴿١٧﴾

108. waxayna dhihi waxaa Nasahan
Eebahanno ee yabooha Eebahanno
waa la fali (Imaan).

وَيَقُولُونَ سُبْحَانَ رَبِّنَا إِنْ كَانَ وَعْدُ رَبِّنَا لَمَفْعُولًا ﴿١٨﴾

109. waxayna u dhacaan wajiga iyagoo
ooyi wuxuuna u kordhiyaa «Quraanku»
Khushuuc.

وَيَجْرُونَ لِلَّذِينَ يَبْكُونَ وَيَزِيدُهُمْ خُشُوعًا ﴿١٩﴾

110. waxaad dhahdaa ama ku barya
Allaah, ama ku barya Raxmaan wax
kasta ood ku baridaan wuxuu leeyahay
magacyo fiican, ee ha la qayliyina
Akhriskaaga (salaadda) hana qarsan
ee doon jid u dhexeeya Arrintaas
«dhexdhexaad».

قُلْ أَدْعُوا اللَّهَ أَدْعُوا وَالرَّحْمَنَ أَيًّا مَا تَدْعُونَ فَلَهُ
الْأَسْمَاءُ الْحُسْنَىٰ وَلَا تَجْمَعَنَّ بَصَلَاتِكَ وَلَا تُخَافُ
بِهَا وَابْتَغِ بَيْنَ ذَلِكَ سَبِيلًا ﴿٢٠﴾

111. waxaadna dhahdaa mahad Eebaa iska leh een Yeelanin Ilmo, una sugnayn shariig xukunkiisu (la wadaage) una sugnayn gargaare dulli dartiis (uga gargaare) ee waynee waynayn (Sharrif).

وَقُلِ الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي لَمْ يَتَّخِذْ وَلَدًا وَلَمْ يَكُنْ لَهُ شَرِيكٌ فِي الْمَلِكِ وَلَمْ يَكُنْ لَهُ وِثْرٌ مِنَ الْأَمْرِ وَكَبِيرَةٌ تَكْبِيرًا ﴿١١١﴾

Gaalase ama ha rumeeyeen Quraanka ama ha beeniyeen, waxaana rumeeyey oo sujuud la dhacay markii lagu akhriyey kuwii fiicnaa ee cilmiga lahaa ee xaqa rumeeyey ee Ehelu Kitaabka ahaa, iyagoo waynayn Eebe rumayn yaboohiisa, Ooyina iyagoo sujuudi oo khushuuci, gaaladiina waxay Nici jireen Magaca Eebe ee Raxmaana markaasaa Eebe u caddeeyey Muslimiinta inay Eebe ku baryikaraan magacyadiisa ama Alle ama Raxmaan illeen Magacyo Badan oo fiican yuu leeyahaye, wuxuuna Nabiga ku faray inuusan ku qaylyin oo kor uqaadin Akhriska Salaadda hoosna u dhigin ee si dhexdhexaada u akhriyo, kuna mahdiyo Eebahaan yeelanin Ilmo, wax la wadaaga xukunkana jirin iyo uga gargaare dulli, una wayneeyo siduu muto, Eebaa wayn oo awood leh, wax la wayneeyana ah, wax cibaado, xukun, caddaalad, sharci, maamul, iyo wanaag la wadaaga ama u kaalmeyana ma jiro, waxa ka soo hadhay dhammaan waa masaakiin Tabar yar oo Naxariista Eebe hoos joogta sugina. Al-Israa' (107-111).



Suurat Al-Kahf

سُورَةُ الْكَافِرِينَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Mahad Eebaa iska leh Eebaha ku soo Dejiyey Addoonkiisa (Nabi Muxamad ah) Kitaabka (Quraanka) oon yeelinna Dhexdiisa Qallooc.

الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَنْزَلَ عَلَى عَبْدِهِ الْكِتَابَ وَلَمْ يَجْعَلْ لَهُ عِجَابًا ۝

2. Waana Toosanyahay si uu ugaga Digo Cigaab daran oo Eebe Xaggiisa ka ahaatay, uguna Bishaareeyo Mu'miinta fala Wanaagga inay Muteen Ajir Fiican.

فَيَمَّا يَسُدُّرُ بِأَسَاذِيدِ آتَيْنَ لُدُنَهُ وَيُدِيرُ الْمُؤْمِنِينَ الَّذِينَ يَسْمَلُونَ الصَّالِحِينَ أَتَى لَهُمْ أَجْرًا حَسَنًا ۝

3. Kuna Nagaanayaan (Janada) Wali-good.

مَتَكِينِينَ فِيهِ أَبْنَاءُ ۝

4. Ugana Digo kuwa Yidhi wuxuu yeeshey Eebe Ilmo.

وَيُنذِرُ الَّذِينَ قَالُوا اتَّخَذَ اللَّهُ وَلَدًا ۝

5. Uma laha wax Cilmi ah iyaga iyo Aabayaalkood midna, waxaana waynaatay Kalimad ka soo Baxday Afafkooda, mana dhahayaan waxaan Been ahayn.

مَا لَهُمْ بِهِ مِنْ عِلْمٍ وَلَا لِآبَائِهِمْ كَبُرَتْ كَلِمَةً تَخْرُجُ مِنْ أَفْوَاهِهِمْ إِنْ يَقُولُونَ إِلَّا كَذِبًا ۝

Suuraddu waxay soo Degtay mar Gaaladii Quresheed ee Makaad u Tageen Qaarkood Yuhuuddii Madiino warsadeenna Xaalka Nabiga oy Yuhuudna ku tidhi waydiya Saddeex arrimood hadduu idiin sheegana waa Nabi Xaq ah, Waydiya Dhalinyaro mar hore jirtay Xaalkoodii, Nin wada maray Adduunka Bari iyo Galbeed, iyo Ruuxda, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ruuxii Xifdiya Tobanka Aayadood ee hore ee Suuratul Kahfi waxaa laga dhawraa Dajaal. Waxaa wariyey (Muslim).

Aayaduhuna waxay Caddayn in Mahad Eebe muto, Quraanka toosanna ku soo Dejiyey Nabiga, si uu uguna Digo, uguna Bishaareeyo, Gaaladuna wax Cilmi ah uma leh Xumaantay Eebe ku Sheegi ee waxay ku Hadli Been iyo waxaan Jirin. Al-Kahf (1-5).

6. Waxaad u Dhawdahay inaad ku (Halaagto) Naftaada Nabiyow Raadkooda (gadaashooda) haddayna rumeyn Quraankan, Walbahaar dartiis.

فَلَعَلَّكَ بَدِخْتُ نَفْسَكَ عَلَى آتِ الرَّهْمَانِ لَمْ يُؤْمَرُوا بِهَذَا الْحَدِيثِ أَسَفًا ۝

7. Waxaan ka yeellay waxa Dhulka Korkiisa ah Quruxdiisa, si aan u Intixaanno Midkooda Fiican-Camal.

إِنَّا جَعَلْنَا مَا عَلَى الْأَرْضِ رَيْتًا لِّهَا لِنَبْلُوهُمْ أَيُّهُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا ﴿٧﴾

8. Waxaana ka yeelaynaa waxa korkeeda ah Bannaan aan wax ka soo Bixin.

وَأَنَّا لَجَاعِلُونَ مَا عَلَيْهَا صَعِيدًا جُرُثًا ﴿٨﴾

9. Ma waxaad u malaysay Nabiyouw Godkii Asaxaabtiisii (Dadkiisii) iyo Kitaabkii (iyo Looxii) inay ugu yaab badantahay Aayaadkanaga.

أَمْ حَسِبْتُمْ أَن أَصْحَابَ الْكَهْفِ وَالرَّقِيْمِ كَانُوا مِن آيَاتِنَا عَجَبًا ﴿٩﴾

10. Waa markay u Dummeen Dhallinyaradu Godka oy dhaheen Eebow naga sii Agtaada Naxariis noona Darab Amarkanaga Hanuun.

إِذْ أَوَى الْفِتْيَةُ إِلَى الْكَهْفِ فَقَالُوا رَبَّنَا آتِنَا مِن لَّدُنكَ رَحْمَةً وَهَيِّئْ لَنَا مِنْ أَمْرِنَا رَشَدًا ﴿١٠﴾

11. Markaasaan ku Siidaynay Hurdo Godka dhexdiisa Sanooyin Badan.

فَضَرَبْنَا عَلَىٰ آذَانِهِمْ فِي الْكَهْفِ سِنِينَ عَدَدًا ﴿١١﴾

12. Markaasaan soo Bixinnay si aan u Muujinno Labada Xizbi midkooda Kobid Badan intay Nagaadeen Muddo.

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنْهُمُ ثَلَاثًا مِّنَ الْجِبْرِائِْلِ أَحْصَىٰ لِمَا لِيَسُوا أَمَدًا ﴿١٢﴾

Wuxuu Eebe Halkan ku Calool Adkaysiin kuna Samirsiin Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) isagoo u Tilmaami inuusan waxba Walbahaar isugu badin hadday Gaaladu Rumeyn waayeen Quraanka, Illeen Eebe Intixaan yuu u Abuuray waxa Dhulka korkiisa ahe, iyo in la eego kan Camal-Fiican, Eebaana halaagi waxa Dhulka ku kor Nool.

Qisada Asxaabul Kahfina wax layaab leh ma aha waxayse ahaayeen Dhallinyaro Hanuuntay oo Eebe warsaday Toosnaan markaas Eebe Seexiyeey Godka Sanado Badan, kadibna Eebe soo Bixiyeey si loo Muujiyo Cidda koobtay intay Nagaadeen. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Adduunyadu waa Macaan Cagaaran, Eebana wuu idinku reebay isagoo Fiirin waxaad Camal Fashaan ee ka Dhawrsada Adduunyo, kana dhawrsada Ragoow haween, Illeen Fidmadii ugu Horaysay Banii Israa'iiil waxay ahayd Haweeneye.

Aayaduhuna waxay ku tusin Dhawrka iyo Diidada Xumaanta iyo in Ciddii dan Eebe u Camal Fasha uu Eebe Faraj u Furi, Guushana ku Dambeysiin, iyo Wanaagga Adkaysiga iyo Samarka. Al-Kahf (6-12).

13. Anagaa kaaga Qisoon warkooda si Xaq ah, waxay ahaayeen Dhallinyaro rumeeyey Eebehood, waxaana u siyaadinay hanuun.

ثُمَّ نَقُصُّ عَلَيْكَ نَبَأَهُم بِالْحَقِّ إِنَّهُمْ فِتْيَةٌ آمَنُوا بِرَبِّهِمْ وَرِذَّئْنَاهُمْ هُدًى ﴿١٣﴾

14. waxaan xoojinnay (oon adkaynay) quluubtooda, oyna dhaheen Eebehanna waa Eebeha Samaawaadka iyo Dhulka, baryinamayno (Caabudimayno) Ilaah ka soo hadhay, waxaan ku hadalnay markaas hadal Xun (oo baadil ah).

وَرِظْنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ إِذْ قَامُوا فَقَالُوا رَبُّنَا رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ لَن نَدْعُوهُم دُونَهُ إِذْ هُمْ أَهْلًا لِّقَدْرَتِنَا إِذَا سَطَطْنَا ﴿١٤﴾

15. kuwaasu waa qoomkanagii waxay yeesheen Eebe ka sokow ilaahyo, mey u keenaan korkooda wax xujocad ah, yaase ka dulmi badan ruux ku abuurtay Eebe dushiisa been.

هَؤُلَاءِ قَوْمُنَا اتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ آلِهَةً لَوْلَا يَأْتُونَ عَلَيْهِمُ الْمَلَائِكَةُ مِنْ رَبِّكَ مَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا ﴿١٥﴾

16. markaad ka fogaataan gaalada iyo waxay caabudi oo Eebe ka soo hadhay u dunma godka wuxuu idiin fidin Eebihii naxariise idinkanadarbi amar-kiinna waxaad ku istareexdaan kuna kala saartaan xumaanta iyo wanaagga.

وَإِذْ اتَّخَذْتُمْ مُوهُهُمْ وَمَا تَعْبُدُونَ إِلَّا اللَّهَ فَأَوْسُوا إِلَى الْكَهْفِ يَنْشُرْ لَكُمْ رَبُّكُمْ مِنْ رَحْمَتِهِ وَيُهَيِّئْ لَكُمْ مِنْ أَمْرِكُمْ مِزْقًا ﴿١٦﴾

aayadahan waxay sharxi qisada asxaabul kahfi, Ibnu kathiir wuxuu yidhi: eebe wuxuu sheegay inay dhalinyaro ahaayeen, iyagaana xaqa ka aqbali og kagagana hanuunin og jidka odayada ku madaxtaagay kuna dabaashay baadilka, saas darteed yey kuwii u badnaa ee ajiibay eebe iyo rasuulkiisa ahaayeen dhallinyaro, odayadii qureesheedse intoodii badnayid waxay ku hadheen diintoodii. cebana wuxuu sheegay inay ahaayeen dhallinyaro rumeysan xaqa, qalbigodana eebe xaqa ku sugay, ilaah mooyee aan wax kalena u jeedsan, kana leexday jidkii xumaa ee qoomkoodii, dar Eebana u tegay Godkana u aaday, Eebana xoojiyey waafajiyeyna wanaagga. Rasuulkuna (Naxariis Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee wuxuu yidhi: waxay u dhawdahay inay noqoto xoolo kan ugu khayrroon adhi uu ku raaco buuraha iyo roobka isagoo kala carari diintiisa fidmada. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Abu Daa waud. Al-Kahf (13-16).

17. waxaad arkaysaa Qorraxda oo markay Dhalato uga iilan Godkooda xagga Midig, markay dhicina ka Gooyin xagga bidix iyagoo ku sugan Meel Waasac ah oo Godka, taasina waxay ka mid tahay Aayaadka Eebe, Ruuxuu hanuuniyo Eebe unbaa hanuunsan, Ruuxuu Dhumiyana u helimaysid Gar-gaare hanuuniya.

* وَتَرَى السَّمْسَ إِذَا طَلَعَتْ تَزْوُورُ عَنْ كَهْفِهِمْ ذَاتَ الْيَمِينِ وَإِذَا غَرَبَتْ تَقَرُّصُهُمْ ذَاتَ الشِّمَالِ وَهُمْ فِي فَجْوَةٍ مِنْهُ ذَلِكَ مِنْ آيَاتِ اللَّهِ لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٧﴾

18. Waxaad u malayn inay soo jeedaan iyagoo Jiifa, waxaana u gagadin Midig iyo Bidix, Eygoodiina wuxuu ku fidin Dhudhumadiisa Albaabka, haddaad aragto waad ka jeedsanlahayd, adoocari waxaana lagaa buuxinlahaa Xagooda Argagax.

وَتَحْسَبُهُمْ آيَةً أَنْطَا وَهُمْ رُفُودٌ وَقِيلَ لَهُمْ ذَاتَ الْيَمِينِ وَذَاتَ الشِّمَالِ وَكُلُّهُمْ بَسِيطٌ ذَرَأْتِهِ بِالْأَوْصِيَاءِ لَوْلَا أَطَّلَعْتَ عَلَيْهِمْ لَوَلَّيْتَ مِنْهُمْ فِرَارًا وَلَمَلَّيْتَ مِنْهُمْ رُعبًا ﴿١٨﴾

19. saasaana u soo bixinay inay is warsadaan dhexdooda, wuxuu yidhi mid ka mid ah imisaad nagaateen, waxay dhaheen waxaan nagaannay

وَكَذَلِكَ بَعَثْنَا لَهُمْ نِسَاءً لَوْلَا بَيْنَهُمْ قَالَ قَائِلٌ مِنْهُمْ كَمْ لَبِئْسَ مَا لَنَا يَوْمَئِذٍ وَأَرَبُّهُمْ يَوْمَئِذٍ

Maalin ama maalin qaarkeed, waxay dhaheen Eebeheenbaa og waxaad naagaateen ee ladira midkiin lacagtan xagga Magaalada, hana soo fiiriyo Cid Cunno xalaalaysan* hana idiinka Keeno Rizqi hana isqariyo (oo istartiibiyo) yuuna idin ogeysiin xaggooda ruuxna.

قَالُوا رَبُّكُمْ أَعْلَمُ بِمَا لَيْسَتْ فَبِعَيْنِنَا أَحَدَكُمْ
يُورِقِكُمْ هَذِهِ إِلَى الْمَدِينَةِ فَلْيَنْظُرُوا لَهَا أَزْكَى
طَعَامًا فَلْيَأْكُلُوا بِرِزْقِ قَوْمِهِمْ وَلَا
يُسْعِرَنَّ بِكُمْ أَحَدًا ﴿١٧﴾

20. iyagu hadday idin arkaan way idin dhagaxyeyn, ama idinku Celin diintooda mana Liibaanaysaan markaas wali-giin.

إِنَّهُمْ إِنْ يَنْظُرُوا عَلَيْكُمْ يَرْجُمُوكُمْ
أَوْ يَصُدُّوكُمْ فِي مَلْتَمَتِهِمْ وَلَنْ يَقْدِرُوا
إِذَا أُنذِرُوا ﴿١٨﴾

Naxariista Ebe darteed waxay ahaayeen kuwo laga dhawray kulaylka qorraxda oy ka maraysay dhinaca dhalasho iyo dhinaca dhicidda, arrintaasna waa Aayaadka Eebe, waxaana hanuuni ruuxii Eebe waafajiyo, kiikalana ma helo hanuuniye Eebe ka soo hadhay, qudrada Eebe way soo jeedeen iyagoo la moodo inay hurdaan, waxay u gagadoomayeen midig iyo Bidix, Eygoodina irriduun jeenyaha ku fidiyey, Cidii aragtana way cabsan lahayd oo carari lahayd, markaasaa Eebe soo bixiyey iyagoo is warsan intay noolaayeen oyna mid ka mid ah magaalada u direen isagoo lacag wata si uu cunno xalaal ah u soo gado isagoo isqarin, illeen waxay ka yaabi in gaaladay ka carareen joogaan oo dilaan ama xoog Diitooda ku galiyaan oy khasaaraan. taasina waxay ku tusin naxariista Eebe iyo awooddiisa iyo inuu falo waxuu doono. Al-Kahf (17-20).

*cidda ugu cunno xalaalsan (dib u cegaha).

21. Saasaan u daalacsiinay (u tusinay) Dadka si ay u ogaadaan in yabooha Eebe Xaq yahay, saacadda (qiyaamana) aan shaki ku jirin (waxaan tusinay) markay ku murmeen dhexdooda amarkooda, oy (isku) dhaheen ka dhisa korkooda, dhismo, Eebahood baa og iyagee, waxay dhaheen kuwii ku reeyey amarkooda aan ka yeelano korkooda Masaajid.

وَكَذَلِكَ أَعْرَبْنَا عَلَيْهِمْ لِيَعْلَمُوا أَن وَعَدَ اللَّهُ
حَقًّا وَأَنَّ السَّاعَةَ لَا رَيْبَ فِيهَا إِذْ يَسْتَرْجِعُونَ
بَيْنَهُمْ أَمْرَهُمْ فَقَالُوا ابْنُوا عَلَيْهِمْ بُيُوتًا رَبُّهُمْ
أَعْلَمُ بِهِمْ قَالَ الَّذِينَ غَلَبُوا عَلَىٰ أَمْرِهِمْ لَنْ
تَنْجِدَنَّا عَلَيْهِمْ مَسْجِدًا ﴿١٩﴾

22. waxay dhihi waxay ahaayeen saddex waxaana afreeyey Eygoodii, waxay dhihi waxay ahaayeen shan waxaana lixeeyey eygoodii iyagoo iska gani wax maqan (iska dhihi cilmi la'aan) waxay dhihi waxay ahaayeen todobo waxaana siddeedeeyey eygoodii, waxaad dhahdaa Eebahay baa og tiradooda, mana oga wax yar mooyee, ee ha kula murmin xaalkooda muran muuqda oo

سَيَقُولُونَ ثَلَاثَةٌ رَأَيْنَاهُمْ كَلْبَهُمْ وَيَقُولُونَ
خَمْسَةٌ سَادِسُهُمْ كَلْبُهُمْ رَجْمًا بِالْغَيْبِ
وَيَقُولُونَ سَبْعَةٌ وَاتَّامَنُوكُم بِهِمْ قُلْ رَبِّي
أَعْلَمُ بِعَدَّتِهِمْ مَا بَعَثْنَاهُمْ إِلَّا قَلِيلًا فَلَا تُنْمِرُ بِهِمْ
إِلَّا مِرَاءً ظَهَرَ وَلَا اسْتَنْفَتْ فِيهِمْ وَنَهْنَاهُمْ أَحَدًا ﴿٢٠﴾

fudud mooyee, hana waydiin xaggooda Ruuxna.

Waxay keentay xigmadda Eebe in la arko dhallinyaradaa si loo ogaado in yabooha Eebe xaq yahay, qiyaamadana aan shaki ku jirin, markay arkeen oy ka dibna dhinteen yey ku murmeen in ardaagooda wax ku dhisaan waxaase reeyey kuwii rabay in masaajid lagu dhiso. tan kale waxaa lggu murmay tiradooda intay ahayd, cid ognna ma Jirto Eebe Mooyee. taasoo kuwo dhaheen waxay ahaayeen seddex iyo eygoodii, kuwana shan iyo eygoodii, kuwana todoba iyo eygoodii, Eebaase og intay ahaayeen, cid ognna ma jirto wax yar mooyee, in lagu murmana ma haboona si fudud oo wax is tus ah mooyee, cid ehelu kitaabka ahna waxba lagama warsado.

qisadana waxaa loo baahanyahay ruuxii Mu'min ah inuu si fiican u rumeeyo una hogaansamo, illeen Eebe wax walba wuu karaaye marba hadduu Eebe abuuray cirka, dhulka iyo khalqiga kalaba awoodiisu xad ma leh'wuxuu doonana wuu falaa, kuwa shakin arrimahan oo kalana waa; kuwo caqli yar oo wax walba ku eegi muraayadahooda aragga gaaban ama aragga xumaysa. Tan kale waxay ku tusin in xaqa iyo ehelkiisu hadho xumaanta iyo Ehelkeeduna tago. Al-Kahf (21-22).

23. ha ku dhihin shaygaasaan fali barri.

وَلَا تَقُولنَّ إِنَّا سَأَأُنَّ إِلَىٰ فَاعِلٌ ذَٰلِكَ عَدَا ۝٢٣

24. (adoon dhihin) hadduu doono Eebe, xusna Eebahaa haddaad halmaanto, waxaadna dhahdaa wuxuu u dhawyahay inuu igu hanuuniyo Eebahay wax ka dhaw kaas oo toosni ah.

إِلَّا أَن يَسْأَلَهُ اللَّهُ وَأَذْكَرٌ رَبُّكَ إِذَا نَسِيتَ وَقُلْ عَسَىٰ أَن يَهْدِيَنِّي رَبِّي لِأَقْرَبَ مِن هَٰذَا رَشْدًا ۝٢٤

25. waxay ku nagaadeen godkoodii seddex boqol oo sano waxayna siyaad-sadeen sagaal.

وَلَيْسُوا فِي كَهْفِهِمْ ثَلَاثَ مِائَةٍ سِنِينَ وَازْدَادُوا تِسْعًا ۝٢٥

26. waxaad dhahdaa Eebaa og waxay nagaadeen waxaa u sugnaaday waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, arki ogaa oo maqli ogaa Eebe, umana sugnaanin Dadka isga ka sokow gargaare lamana wadaajiyiyo xukunkiisa Cidna.

قُلْ اللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا لَيْسُوا لَهُ وَعَتَيْ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ أَبْصِرْ بِهِ وَأَسْمِعْ مَا لَهُمْ مِنْ دُونِهِ مِن وَلِيٍّ وَلَا يُشْرِكُ فِي حُكْمِهِ أَحَدًا ۝٢٦

Eebe wuxuu ku hanuuniyey nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) aadaab fiican oo ah inuusan dhihin waxaasaan fali isagoon raacinin hadduu Eebe doono, Mu'miniintana saasaa laga rabaa, waana in had iyo jeer la xusaa Eebe si halmaanshaha shaydaanka looga fogaado, hanuunkana Eebe la warsadaa. dhallinyaradii asxaabul kahfina intay ku nagaadeen Godka Eebaa og waana mudadaas Eebe sheegay, illeen Eebaa og waxa maqan arkana maqlana, dadkana wax gargaare ah oo Eebe ka soo hadhay ama Xukunka la wadaaga ma jiraan. Eebana isagaa sayid awood leh ah, xukun, dil, dayn, irzaaqid, naxariis, xoog iyo tasarruf dhamaantiisna isagaa iska leh, wax kula wadaaga cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeyana ma jiro, saasdarteed waa in dhab ahaan loo caabudo, loona hogaansamo, sharcigiisana lagudhaqmo, xagga xukunka, mucaamalada, akhlaaqda iyo nololaha dhammaanteedba, Al-Kahf (23-26).

27. akhri (oo raac) waxa lagu waxyooday oo kitaabka Eebahaa ah, wax baddali kalimooyinkiisana ma jiro, mana helay sid wax ka sokeeya ood magangashid.

وَأَنْتَ مَا أُرْسِي إِلَيْكَ مِنْ كِتَابٍ رَبِّكَ لَا مُبَدِّلَ
لِكَلِمَاتِهِ وَلَنْ تَجِدَ مِنْ دُونِهِ مُلْتَحَدًا ﴿٢٧﴾

28. ee ku samirsii naftaada la jirka kuwa baryaya Eebahood aroor iyo galabba, iyagoo dooni wajigiisa, yeyna ka iilanin Indhahaagu xagooda adoo dooni quruxda nolosha dhaw (ee aduun) hana adeecin ruuxaan halmaansiinnay qalbigiisa xusiddanada oo raacay hawadiisa uuna ahaaday amarkiisu xadgudub (iyo Xumaan).

وَأَصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدْوَةِ
وَالْعَيْشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ وَلَا تَعْدُ عَيْنَاكَ عَنْهُمْ تُرِيدُ
زِينَةَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَلَا تَطْعَمَنْ مِنْ أَعْنَافِكَ قَلْبُهُ عَنْ
ذِكْرِنَا وَاتَّبَعَ هَوْلَهُ وَكَانَ امْرُؤًا فُورًا ﴿٢٨﴾

29. waxaad dhahdaa xaqu Eebihiin buu ka ahaaday ee ciddii doonta ha gaalowdo, anagu waxaan u darabnay daalimiinta naar oy koobtay iyaga (barxadeedu) iyo darbigeedu, hadday kaalmo warsadaanna waxaa loogu kaalmeeyaa biyo daamuur oo kale ah oo duba wajiyada iyagaa u xun cabbid iyadaana u xun dangiigsi.

وَقُلِ الْحَقُّ مِنْ رَبِّكَ فَمَنْ شَاءَ فَلْيُؤْمِنْ وَمَنْ شَاءَ
فَلْيُكْفُرْ إِنَّا أَعْتَدْنَا لِلظَّالِمِينَ نَارًا أَحَاطَ بِهَا
سُرَادِقُهَا وَإِنْ يَسْتَوِيضُوا لِنُورِهَا كَالْمُهْلِ يَشْوِي
الْوُجُوهَ يَتَسَاءَلُ السُّرَابُ وَسَاءَتْ مُرْتَفَقًا ﴿٢٩﴾

Eebe wuxuu faray Nabigiisa inuu akhriyo kitaabka quraanka ah Dadkana gaadhsiiyo wax badali karana ma jiro, meel lamagan galoo Eebe ka soo hadhayna ma jiro. Waxaa kaloo Eebe faray nabiga inuu la noolaado Mu'miniinta baryi Eebahood had iyo jeer kana iilanin indhiliisu isagoo dooni nolosha adduuno, uusan maqlin kuwa qalbigooda la halmaansiyyey xuska Eebe oo hawadooda xun raacay xadna gudbay, xaquna waa cadyahay ee ciddii doonta ha raacdo tii doontana ha gaalowdo, waxaa uun gaalo loo darbay cadaab oo Gubee, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee) wuxuu yidhi: Qoomkii kulma iyagoo xusi Eebe oo wajigiisa dooni waxaa looga dhawaaqaa cirka kaca waa laydiin dambi dhaafaye wuxuuna ku badalay Xumaantiinna wanaaage. (Imaam Axmed).
Al-Kahf (27-29).

30. Kuwa rumeeyey (Xaqa) oo camal fiican falay annagu ma hallayno ajarka ciddii Wanaajisa Camalka.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ إِنَّا لَا نُضِيعُ
أَجْرَ مَنْ أَحْسَنَ عَمَلًا ﴿٣٠﴾

31. Kuwaas waxay mudan janada Cadnin oo dureeri Dhexdeeda Wabiyaal, looguna Labisi Dhexdeeda Jijimo Dahab ah, una xidhay Maryo Cagaaran oo Xariir Jilicsan iyo mid adagba, waxayna

أُولَئِكَ لَهُمْ جَنَّاتُ عَدْنٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ يُكْرَمُونَ
فِيهَا مِنْ سَاوِيٍّ مِنْ ذَهَبٍ وَيَلْبَسُونَ فِيهَا خُضْرًا وَرِجَالُهُمْ
سُنَابِقٌ مِثْلُ بَرَقِ الْمُرْجَانِ فِيهَا عَلَى الْأَرْشِ قَعَمٌ

ku Dangiigsan dhexdeeda Sariiro kor-kood, waa abaal marin Fiican una Wanaagsan meel lagu (istareexo) lagu-na nasto.

الْقَوَابِ وَحَسَنَتْ مُرْتَفَعًا ﴿٣١﴾

32. Uga yeel tusaale Labo Nin oon u yeelay Midkood Laba Beerood oo Cinab ah, kuna koobnay Timir yeellay-na Dhexdeeda Tallaal (beer).

﴿ وَأَضْرِبْ لَهُم مَّثَلًا لِّلَّذِينَ جَعَلْنَا لَأَحَدِهِمَ جَنَّتَيْنِ مِنۢ بَيْنِ يَدَيْهِمَا نَعْلًا مِّنۢ بَخْرٍ وَعِجْلًا مِّنۢ بَيْنِهِمَا زَرْعًا ﴿٣٢﴾

33. Labada Beeroodba oy keentay Cunnadeedii, oyna waxba Nusqaamina, oon kana Dhambalay dhexdeeda Wabiyo.

كِلْتَا الْجَنَّتَيْنِ ءَاتَتْهُمَا مِنۢ بَيْنِ يَدَيْهِمَا نَعْلًا مِّنۢ بَخْرٍ وَعِجْلًا مِّنۢ بَيْنِهِمَا زَرْعًا ﴿٣٣﴾

34. Midhana uu leeyahay oo markaas ku yidhi Saaxiibkiis asagoo hadalka ku celcelin anaa kaa Xoolo badan Kaana Tol badan.

وَكَانَ لَهُ ثَمَرٌ فَقَالَ لِصَاحِبِهِ وَهُوَ يُحَاوِرُهُ أَنَا أَكْثَرُ ثَمَرًا ۗ قَالَ أَعْلَمُ بِمَا تُكْفِرُ ۗ ﴿٣٤﴾

35. Wuxuu galay Beertiisii isagoo dulmiyey Naftiisa, wuxuu yidhi uma malaynayo inay Halaagsami Waligeed.

وَدَخَلَ جَنَّتَهُ وَهُوَ ظَالِمٌ لِّنَفْسِهِ ۗ قَالَ مَا أَظُنُّ أَن تَبِيدَ هَذِهِ ۗ أَبَدًا ﴿٣٥﴾

36. Umana Malanayo in Saacadda (Qiyaame) kici, haddii lay celiyo Xagga Eebahayna waxaan ka heli mid ka kharroon Noqoshada.

وَمَا أَظُنُّ السَّاعَةَ قَائِمَةً وَلَئِن رُّدِدْتُ إِلَىٰ رَبِّي لَأَجِدَنَّ خَيْرًا مِّنَهَا مُنْقَلَبًا ﴿٣٦﴾

Kuwa Xaqa rumeeyey oo Wanaagga falay waxaa Fiican ee Eebe u darbay waxbadan yuu Quraanku ka warramay, halkan Arrintaas yaa ku Cad. Aayadaha kale waxay ka Qisoon Laba Nin oo midkood beera badnaa uguna faanay Saaxiibkiis inuu ka Xoolo iyo Dad Badanyahay Isagooy Yaabgalisay Beertiisu, iyo waxa ka baxay oo Midha ah iyo waxa dhexsocda oo biyo ah. Intuu ka inkiro oo ka Gaaloobo Dhicidda Qiyaamada. Mana haboona in Nicmada Eebe laqaabiliyo Diiddo, Gaalnimo, Faan iyo Kibir ee waa in Eebe lagu Aqoonsado laguna Mahdiyo looguna kaalmaysto Cibaadada Eebe. Qataade wuxuu yidhi: Taasi Wallee waa Yididiilada Faajirka, Xoolo Badni iyo Qaraabo Xoogle. Al-kahf (30-36).

37. Wuxuu yidhi saaxiibkiisii isagoo la hadli ma waxaad ka gaaloowday Eebaha kaa Abuuray Carro, hadana dhibic markaas ku ekeeyey adoo nin ah.

قَالَ لَهُ صَاحِبُهُ وَهُوَ يُحَاوِرُهُ أَكَفَرْتَ بِالَّذِي خَلَقَكَ مِن تُرَابٍ ثُمَّ يُعِيدُكَ ثُمَّ يَمُوتُ لَكَ رَبًّا ۗ جَلَّ جَلَلُهُ ۗ فَمَن مِّنۢ بَيْنِ أَهْلِ الْكِتَابِ يَفْضُلُكَ عَلَىٰ خَلْقِكَ ۗ إِنَّكَ أَجْرَبُهُمْ ۗ ﴿٣٧﴾

38. hasa yeeshee ilaahay waa Eebahay lana wadaajin maayo Eebahay (cibaadada) cidna.

لَٰكِنَّا هُوَ اللَّهُ رَبِّي وَلَا أُشْرِكُ بِرَبِّي أَحَدًا ﴿٣٨﴾

39. maxaadan markaad gasho beerta-

وَلَوْلَا إِذْ دَخَلْتَ جَنَّتَكَ قُلْتَ مَا شَاءَ اللَّهُ لَا قُوَّةَ إِلَّا

da u dhihin wuxuu Allah doono wuu ahaadaa, xoogna uma lihin daacadda Alle hadduusan awood noo siin. haddaad aragtay anoo kaa yar adiga xoolo iyo Caruurba.

يَا اللَّهُ إِنَّ تَرِينَ أَنَا أَقَلُّ مِنْكَ مَا لَمْ يُولَدْكَ ﴿٣٨﴾

40. wuxuu u dhawyahay Eebahay inuu I siiyo wax ka khayr badan Beertaada, kuna diro korkeeda aafu samo, oy markaas ahaato bannaan lagu simbiririxoodo.

فَعَسَىٰ رَبِّي أَن يُوَفِّيَنَّ خَيْرًا مِنْ خَيْرِكُمْ وَيُرْسِلَ عَلَيْهَا حُسْبَانًا مِنَ السَّمَاءِ فَتُصْبِحُ صَعِيدًا زَلَقًا ﴿٣٩﴾

41. ama ahaadaan biyaheedu kuwa gudha oodan karin doonid (soo celin).

أَوْ يُصْبِحَ مَاؤُهَا غَوْرًا فَلَنْ تَسْتَطِيعَ لَهُ طَلَبًا ﴿٤٠﴾

42. waa la koobay midhihiisii (la halaagay) oo ahaaday kii gaddin gacmihiisa wuxuu ku bixiyey iyadoo ku dhacday darbiyadeeda, isagoo leh shalleytee maanan la wadaajin Eebahay Cidna.

وَأُحِيطَ بِثَمَرِهِ فَأَصْبَحَ يُقَدِّبُ كَفَيْهِ عَلَىٰ مَا أَفْقَىٰ فِيهَا فِي حَاوِيَةٍ عَلَىٰ عُرُوشَهَا وَيَقُولُ لَيْسَتَنِي لَمْ تُضِرْكُم بِرَبِّي أَحَدًا ﴿٤١﴾

43. uma ahaanin koox u gargaarta oo ka soo hadhay Eebe mana aha mid gargaarta.

وَلَمْ تَكُن لَّهُ فِئَةٌ يَنْصُرُونَهُ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَمَا كَانَ مُنتَصِرًا ﴿٤٢﴾

44. halkaas (qiyaamada) yey awoodu u ahaan Eebaha xaqa ah, isagaana kahyrroon abaal marin kahyrroonna cidhib.

هَٰذَاكَ الْوَالِيَةُ لِلَّهِ الْحَقِّ هُوَ خَيْرٌ ثَوَابًا وَخَيْرٌ عُقْبًا ﴿٤٣﴾

Saasay kala yihiin muslim iyo gaal, waxaa inoo soo hormaray warkii gaalka iyo waxuu ku abaal mariyey Nicmada Eebe, mu'minkiina waa kan xusuustay sida Eebe u abuuray ninna uga dhigay, iyo inayna haboonayn in Cibaadada waxlala wadaajiyo, iyo Eebe lagu mahdiyo Nicmadiisa awoodana loo qiro, oon laguna faanin xoolo iyo caruur, illeen Eebaa halaagi kara oo tirtiri karee, waxaana lagu abaal mariyey gaalkii faanayey in la halaagay beertiisii oo uu shallaytooday wuxuu ku bixiyey, uuna qoomamooday waqti ayana waxtarayn qoomamo wax u gargaarana uusan jirin, isna gargaaran karin, xukunka iyo awoodana Eebaha xaqa ah yaa leh, maalinta qiyaame. Rasuulku (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Abuu Hureyrow ma ku tusiyaa kansi ka mid ah kansiyada janada markaasuu yidhi: haa Aabahay iyo Hooyaday ha lagugu furtee, markaasuu yidhi: waa inaad dhahdo: Xoog uma Lihi daacada Alle, hadduusan awood ii siin, wuxuuna dhihi Eebe: wuu islaamay addoonkaygii wuuna hogaansamay. Waxaa wariyey (Imaan Axmed). Al-Kahf (37-44)

45. uga yeel Nabiyow tusaale nolosha Adduunyo Biyo oo kale oon ka soo dejinay samada oo isku darsamay waxa

وَأَضْرَبَ لَهُمْ مَثَلًا الْحَيٰوةِ الدُّنْيَا كَمَاءٍ أُنزِلَتْ مِنْ سَمَاءٍ فَأَخْتَلَطَ بِهِ نَبَاتُ الْأَرْضِ فَأَصْبَحَ هَشِيمًا

ka soo baxay dhulka oo markaas noqday ingayg kala firdhiso dabayluhu, wuxuuna ahaaday Eebe kii wax kasta kara.

نَدْرُوهُ الرِّيحُ ۖ وَكَانَ اللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ مُّقْتَدِرًا ﴿٤٥﴾

46. xoolaha iyo wiilashu (caruurtu) waa quruxda nolosha adduunyo, kuwa hadha ee wanaagsan yaa ku khayrroon Eebahaa agtiisa abaalmarin una khayrroon yididiilo (camalka fiican).

الْمَالِ وَالْأَنْوَانَ زِينَةَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَالصَّالِحَاتِ خَيْرٌ عِنْدَ رَبِّكَ ثَوَابًا وَخَيْرًا أَمْلًا ﴿٤٦﴾

47. xus maalinta aannu kaxayn buuraha ood arkayso dhulka oo muuqda, oon soo kulminay dadkii oonan ka tagin cidna.

وَيَوْمَ نُسَيِّرُ الْجِبَالَ وَتَرَى الْأَرْضَ بَارِدَةً وَخَسِرَنَّهُمْ فَلَمَّا تَفَادَوْا مِنْهُمُ أَحَدًا ﴿٤٧﴾

48. waxaana loo bandhigi dadkii Eebahaa iyagoo saf ah, dhab ahaan yaad noogu timaadaan saan idiin abuuray markii horaba (yaa lagu dhihi) waxaadse sheegateen inaanaan idiin yeeballan «kulma».

وَعُرْضُوا عَلَىٰ رَبِّكَ صَفًا لَّقَدْ جِئْتُمُوكَ كَمَا خَلَقْتُمْكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ بَلْ زَعَمْتُمْ أَلَّنْ نَجْعَلَ لَكُمْ مَتَوَعَدًا ﴿٤٨﴾

49. waxaana la dejin (keeni) Kitaabkii (camalka) waxaadna arkaysaa dambii-layaashii oo ka cabsan waxa ku sugan oo dhihi hallaagane muxuu leeyahay kitaabkan oosan uga tagayn wax yar iyo wax wayn ee uu koobay wayna heli waxay camal faleen oo jooga, manadulmiyo Eebahaa cidna.

وَوَضِعَ الْكِتَابَ فَتَرَى الْمُعْجِرِينَ مُشْفِقِينَ مِمَّا فِيهِ وَيَقُولُونَ يَا وَيْلَتَنَا مَالِ هَذَا الْكِتَابِ لَا يُغَادِرُ صَغِيرَةً وَلَا كَبِيرَةً إِلَّا أَحْصَاهَا وَوَجَدُوا مَا عَمِلُوا حَاضِرًا وَلَا يَظُنُّ رَبُّكَ أَحَدًا ﴿٤٩﴾

Aayado badan yaa ka warramay adduunyada iyo say ku dambeyn iyo inay habboontahay inaan lagu kadsomin xoolo iyo caruurna waxba kama taraan Eebe agtiisa, ee waxaa wax tara camalka fiican ee hadhi, maalinta qiyaame ee buuraha la kaxayn dhulkuna bannaan noqon ee dadka lasoo kulmin cidna lagamatagayo, dadkuna way imaan iyagoo safan sidii eebe ugu abuuray oo kale, inkastooy gaaladu diideen, waxaadna arki maalintaas dambii-layaasha oo cabsan oo calaacali iyagoo sheegi inuusan kitaabka camalka lagu qoro wax yar iyo wax wayn midna ka tagayn, cid walbana heli waxay camal fashay oo jooga, isagoon Eebe cidna dulmayn. waxaana sugnaatay in Eebe soo kulmin dadka qiyaamada una dhawaaqi iyagoo wada maqli laysuna qisaasi xataa dharbaaxada, waxaana loo kala qaadi khayrka iyo sharka. Al-Kahf (45-49).

50. (xusuuso) markaan ku nidhi Ma-laa'igta u sujuuda Aadam, oo ay sujudeen Iblis mooyee, wuxuu ka mid yahay Jinniga wuxuuna ka faasiqoobay

وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ كَانَ مِنَ الْجِنِّ فَفَسَقَ عَنْ أَمْرِ رَبِّهِ ۖ

(baxay) amarka Eebe, miyaad ka yeelanaaysaan isaga iyo faraciisa gargaare ani ka sokow iyagoo col idiin ah, waxaa u xun daalimiinta badelkooda (ibliis).

أَفَتَتَّخِذُونَهُ وَذُرِّيَّتَهُ أَوْلِيَاءَ مِنْ دُونِي وَهُمْ لَكُمْ عَدُوٌّ بِئْسَ لِلظَّالِمِينَ بَدَلًا ﴿٥٠﴾

51. marag ugama dhigin kuwaas abuurka Samooyinka iyo dhulka iyo abuurka Naftooda, mana ihi mid ka yeelan baadiyayaalka kaalmo.

* مَا أَشْهَدُ لَهُمْ خَلْقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَلَا خَلْقَ أَنْفُسِهِمْ وَمَا كُنْتُمْ مُتَّخِذَ الْمُضِلِّينَ عَضُدًا ﴿٥١﴾

52. (xusuuso) maalinta Eebe dhihi u yeedha kuwaad ila wadaajiseen (Cibaa-dada) ood sheegteen (adduunka) markaasay u yeedheen mana ajiibin (u jawaabin) waxaana yeellay dhexdooda Meel halaag.

وَيَوْمَ يَقُولُ نَادُوا شُرَكَاءِيَ الَّذِينَ زَعَمْتُمْ فَدَعَوْهُمْ فَلَمْ يَسْتَجِيبُوا لَهُمْ وَجَعَلْنَا بَيْنَهُمْ مَوْبِقًا ﴿٥٢﴾

53. waxayna arkaan dambiilayaashu naarta waxayna yaqiinsan inay ku dhici mana helayaan xageeda meelay uga iishaan.

وَرَأَى الْمُجْرِمُونَ النَّارَ فَظَنُّوا أَنَّهُمْ مُوَاعِنُهَا وَلَمْ يَجِدُوا عَنْهَا مَصْرَفًا ﴿٥٣﴾

54. dhab ahaan yaan ugu caddaynay quraankan dadka tusaale Kasta, waxayna ahaadeen dadkii Kuwo muran badan.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَا فِي هَذَا الْقُرْآنِ لِلنَّاسِ مِنْ كُلِّ مَثَلٍ وَكَانَ الْإِنْسَانُ أَكْثَرَ شَيْءٍ جَدَلًا ﴿٥٤﴾

Ibliis iyo madax adayggiisa iyo siduu dadka u duufsaday xaqa iyo amarka Eebana u diiday waxbadan yuu quraanku soo celceliyey si looga digtoonaado, wax Eebe la maamula xukunka ama uu abuuridda marag uga dhigan ma jiro, qiyaamadana ibliis iyo kuwii caabudi jiray oo warkiisa maqlay wax isuma taraan, waxayna yaqiinsan inay halaagsami meelay uga leexdaanna ayna helayn. quraankana waxbadan yuu eebe ku celceliyey waano iyo tusaale waxayse noqdeen dadkii muran badane. Xasan Basri wuxuu yidhi: Ibliska ka mid manoqon malaa'igta il bidhiqsi, waase asalka jiniga, sida aadanba u yahay sasla dadka. waxaa wariyey (ibnu Jariir).

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu subax toosiyeey sayid Cali iyo Faadumo kuna yidhi: miyeydaan tukaneyn, markaasuu sayid Cali yidhi Rasuulka Eebow naftanada Eebaa maamula markuu na kiciyo yaannu kacaynaa, markaasuu jeedsadey Nabigii isagoo akhrin aayadda, (wuxuu noqday dad wax walba ka muran badane), waxaa wariyey (Bukhaari, Muslim iyo Imaam Axmed). Al-Kahf (50-54).

55. wax ka reebay dadka inay ru-meeyaan markuu u yimid hanuunku oy dambi dhaaf warsadaan Eebahood ma jiro oon ahayn (sugid) inay u timaaddo waddadii kuwii hore, ama ugu yimaaddo cadaab caddaan.

وَمَا مَعَ النَّاسِ أَنْ يُؤْمَرُوا إِذْ جَاءَهُمُ الْهُدَىٰ وَيَسْتَغْفِرُوا رَبَّهُمْ إِلَّا أَنْ تَأْتِيَهُمْ سُنَّةٌ الْأَوَّلِينَ أَوْ يَأْتِيَهُمُ الْعَذَابُ قُبُلًا ﴿٥٥﴾

56. mana dirro sasuullada iyagoon bishaaraynneyn oon digayn, waxayna

وَمَا يُرْسِلُ الْمُرْسَلِينَ إِلَّا مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ

ku murmi kuwii gaaloobay xumaan inay Ku buriyaan Xaqa, waxayna ka yeesheen aayaadkeygii iyo wixii loogu digay jeesjees.

وَيُجَادِلُ الَّذِينَ كَفَرُوا بِالْبِطْلِ يُدْجِبُونَهُ
الْحَقَّ وَيَأْخُذُواً بِالْبِطْرِ وَمَا أَنْزَلُواهُرُوا ﴿٥٦﴾

57. ruuxna kama dulmin badana cid lagu waaniyey aayaadka Eebihis markaas ka jeedsaday xageeda oo halmaamay waxay hormarsadeen gacmihiisu, waxaan yeellay quluubtooda dabool inayan fahmin quraanka dhagahooda culays haddaad ugu yeedho hanuunka ma hanuunayaan waligood.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ ذُكِّرَ بِآيَاتِ رَبِّهِ فَأَعْرَضَ عَنْهَا
وَلِسَى مَا قَدَّمَتْ يَدَاؤُنَا جَعَلْنَا عَلَى قُلُوبِهِمْ أَكِنَّةً
أَنْ يَفْقَهُوهُ وَفِي آذَانِهِمْ وَقْرًا وَإِنْ تَدْعُهُمْ
إِلَى الْهُدَى فَلَنْ يَهْتَدُوا إِذًا أَبَدًا ﴿٥٧﴾

58. Eebahaa waa dambi dhaafe naxariisleh hadduu u qaban dadka waxay kasbadeen (oo xumaan) wuxuu u dada-jin cadaabka, waxayse leeyihiin ballan oyna helayn meelay uga iishaan.

وَرَبِّكَ الْعَظِيمُ ذُو الْرَحْمَةِ لَوْ يُؤَاخِذُهُمْ بِمَا كَسَبُوا
لَعَجَلَهُمْ الْعَذَابَ بَلْ لَهُمْ مَوْعِدٌ أَنْ يَجِدُوا مِنْ
دُونِهِ مَوْيلاً ﴿٥٨﴾

59. taasi waa magaaloooyinkii oon hallaagnay markay dulmi faleen waxaana u yeellay halaagoodii ballan (waqti).

وَتِلْكَ الْقُرَى أَهْلَكَ عَنْهُنَّ لَمَّا ظَلَمُوا وَجَعَلْنَا
لِمَنْ لِكِهِمْ مَوْعِدًا ﴿٥٩﴾

gaalada waxaa xaqa rumeyntiisa ka reebay kibir iyo inay maraan wadadii kuwii hore inta cadaab ugaa yimaaddo, Rasuulladana waxaa loo diray bishaarayn iyo digid. Gaalase muran iyo xaqooy ku tiriraan Xumaan iyo jeesjees waxaan ahayn ma rabaan dulmiina wuxuu ku dhan yahay ruux quraanka lagu waaniyey oo halmaamay waxay hormarsadeen gacmihiisu oo xumaana, illeen qalbigoodaa ka daboolan inay fahmaan, dhagana waa ka culusyihin mana hanuunaan.

Eebaase dambi dhaaf iyo naxariis leh, hadduu dadka u qaban waxay kasban oo xumaan ah wuxuu u soo dadejin lahaa ciqaabta, wuxuuse u yeelay waqti ayan meella uga bixi karin, raadkii umadihii hore ee la halaagayna waa muuqdaa markay xumaanta faleen waxaana loo yeelay halaagooda waqti xadidan, xaqoo ladiido, ku jeesjeeskiisa, waanadoo laga jeedsado, iyo xumaanta oo dhanba waxay sababi ciqaab iyo halaag ee waa in laga digtoonaado lagana fogaado. Al-Kahf (55-59).

60. (xusuuso) markuu ku yidhi (Nabi) Muuse yarkiisii (ardaygiisii) ma joo-gayo intaan ka gaadho kulanka labada Badood, amaana socdo muddo.

وَإِذْ قَالَ مُوسَى لِفَتَاهُ لَا أَبْرَحُ حَتَّىٰ أَنْبَأَ مَجْمَعَ
الْبَحْرَيْنِ أَوْ أَمْضِيَ حُقُبًا ﴿٦٠﴾

61. markay gaadheen kulandooda waxay halmaameen kalluunkoodii oo ka dhigtay waddadiisa badda dhexdeeda Godoo kale.

فَلَمَّا بَلَغَا مَجْمَعَ بَيْنَهُمَا نَسِيحًا وَهُمَا فَاتَمَتَّ
سَبِيلُهُ فِي الْبَحْرِ سَرَبًا ﴿٦١﴾

62. markay tallaabeen yuu ku yidhi khaadimkiisii ina sii qadadeenna wa-

فَلَمَّا جَاوَزَا قَالَ لِفَتَاهُ إِنَّا جَاءْنَا لَعْنَةَ آلِ لَيْسَانَ

xaan kala kulannay safarkeenna daale.

سَفَرْنَا هَذَا صَبَا ﴿١٦﴾

63. wuxuu yidhi (yarkii) ka warran markaan u dumannay dhagixii inaan halmaamay kalluunkii wax i halmaan-siiyey oon shaydaan ahayn inaan xusuusto ma jiro, wuxuuna ka dhigtay waddadiisa badda la yaab.

قَالَ آرَأَيْتَ إِذْ أَوْتَيْنَا إِلَى الصَّخْرَةِ فَإِنِّي نَسِيتُ الْخَوْتُ
وَمَا أُنْسِينِيهِ إِلَّا الشَّيْطَانُ أَنْ أَذْكُرَهُ وَاتَّخَذَ سَبِيلَهُ
فِي الْبَحْرِ عَجَبًا ﴿١٧﴾

64. wuxuu yidhi (Nabi Muuse) kaasi waa kaan doonaynay, waxayna ku noqdeen raadkoodii iyagoo raaci.

قَالَ ذَلِكَ مَا كُنَّا نَبِغُ فَأَوْتَيْنَا عَلَىٰ آثَارِهِمَا
فَصَصَا ﴿١٨﴾

65. waxayna ka heleen addoon ka mid ah addoomadanada oon siinay naxariis agtanada ah ka barneyna agtanada cilmi.

فَوَجَدَا عَبْدًا مِنْ عِبَادِنَا الَّذِي نَبه رَحْمَةً مِنْ عِندِنَا
وَعَلَّمْنَاهُ مِنْ لَدُنَّا عِلْمًا ﴿١٩﴾

waxay ahayd qisadu in Nabi muuse loo sheegay in Nin yaqaanna wuxuusan aqoonin uu joogo meelay labada badood ku kulmaan: tan ruum iyo faaris, ama Afrikada waqooyi, saasayna u qaateen sahay kalluun, markay meel marina halmaameen kalluunkii markay xusuusteenna ku soo noqdeen, halkaasna kula kulmeen addoon Eebe oo suubban, «Khadir». waxayna ku tusin qisadu waynida awoodda Eebe iyo inuu wax walba karo, in cilmiga loo safro oo had iyo jeer la korosado, oon la dhihin waan waynahay ama waxbaan aqaan, day Nabi muuse iyo ardaygiisaba, inayna jirin cid wax walba og oon Ebe ahayn, Eebana wuu canaantaa oo imtixaamaa cidduu doono siduu Nabi Muuse ku falay markuu cilmi sheegtay, in ogaanshaha iyo cilmigaba Eebe agtiisa yihiin ciduu doonana baro. Al-Kahf (60-65).

66. wuxuu ku yidhi muuse ma ku raaci karaa inaad i bartid waxa lagu baray oo hanuun ah.

قَالَ لَهُ وَمُوسَىٰ هَلْ أَتَيْتُكَ عَلَىٰ أَنْ تُعَلِّمَنِي مِمَّا عَلَّمْتَنِي
رُشْدًا ﴿٢٠﴾

67. wuxuuna ku yidhi (Khadir) adigu ma karaysid la jirkayga samir.

قَالَ إِنَّكَ لَنْ تَسْتَطِيعَ مَعِيَ صَبْرًا ﴿٢١﴾

68. seed ugu samri waxaadan koobin milmi (aqoon).

وَكَيْفَ تَصْبِرُ عَلَىٰ مَا لَمْ تُحِطْ بِهِ خُبْرًا ﴿٢٢﴾

69. wuxuu yidhi (musse) waad i heli hadduu Eebe doono mid ku samra oon kuguna caasiyin arrin.

قَالَ سَتَجِدُنِي إِن شَاءَ اللَّهُ صَابِرًا وَلَا أَعْصِي
لَكَ أَمْرًا ﴿٢٣﴾

70. wuxuu yidhi haddaad i raacdo hay waydiinin waxba intaan kaaga sheego (warramo).

قَالَ فَإِنِ اتَّبَعْتَنِي فَلَا تَسْأَلْنِي عَنْ شَيْءٍ وَحَتَّىٰ آخِرَاتٍ
لَكَ مِنْهُ ذِكْرًا ﴿٢٤﴾

71. way tageen intay ka koreen markab oo uu rujiyey (loox) markaas uu yidhi ma waxaad u rujisay inaad dadkeeda

فَأَنْظُرْ لَهَا كَظِيمًا إِذَا رَكِبُوا فِي السَّفِينَةِ خَرَقَهَا قَالَ
أَخْرِقْهَا تُبْعَثُ أَهْلَهَا لَقَدْ جِئْتَ شَيْئًا إِمْرًا ﴿٢٥﴾

maansheyso waxaad la timid arrin wayn.

72. wuxuu ku yidhi miyaanan ku dhihin adigu ma karaysid la jirkayga samir.

قَالَ أَلَمْ أَقُلْ إِنَّكَ لَنْ تَسْتَطِيعَ مَعِيَ صَبْرًا ﴿٧٢﴾

73. wuxuu yidhi (musse) ha iiqabanin waxaan halmaamay hana igu mashaqayn amarkayga si dhib ah.

قَالَ لَا تَأْخُذْ بِلِيْسَانِ سَيِّدِكَ وَلَا تَرْهَقْنِي مِنْ أَمْرِ عَسْرًا ﴿٧٣﴾

74. way tageen intay kala kulmaan wiil (yar) markaasuu dilay, markaasuu yidhi Muuse ma waxaad dishay naf daahir ah oon naf dilin, waxaad la timid shay la inkiro.

فَأَنْطَلَقَا حَتَّىٰ إِذَا لَبِيا غُلَامًا مَّفْتَرًا، قَالَ أَقْسَمْتُ نَفْسًا زَكِيَّةً بِعَآدِ نَفْسٍ لَّقَدْ جِئْتُ شَيْئًا تُكْرَهُ ﴿٧٤﴾

75. wuxuu yidhi miyaanan kuu dhihin adigu ma karaysid la jirkayga samir.

* قَالَ أَلَمْ أَقُلْ لَكَ إِنَّكَ لَنْ تَسْتَطِيعَ مَعِيَ صَبْرًا ﴿٧٥﴾

76. wuxuu yidhi haddaan ku warsado wax tan dabadeed hayla saaxiibin waxaad gaadhay garowsho xaggayga ahe.

قَالَ إِنْ سَأَلْتَهُ عَنِ شَيْءٍ بَعْدَهَا فَلَا تُصَلِّحْنِي قَدْ بَلَغْتَ مِنَ اللَّئِي عُدْرًا ﴿٧٦﴾

way israaceen muuse iyo khadir in muuse wax la baro, taasina ceeb ma aha in cid wax ka qarsoomo oo ka barto cid kale haba ka waynaadee, hase yeeshee waxyaaluhuu sameeyay muusana kula yaabay sida markabka looxa uu ka bixiyey iyo yarka uu dilay, had iyo jeerna wuxuu dhahaa ama adkeysan kartid la socodkeyga. arrimaha Eebe iyo xigmaddiisa yaana wax walba ka sarreeya. Al-Kahf (66-76).

77. way tageen intay ka yimaadaan magaalo oy warsadaan cunno dadkeeda wayna diideen inay martigaliyaan waxayna heleen darbi dooni inuu dumo markaasuu joojiyey wuxuuna yidhi haddaad doonto waxaad ka yeelan lahayd ujuuro.

فَأَنْطَلَقَا حَتَّىٰ إِذَا أَتَيَا أَهْلَ قَرْيَةٍ اسْتَطْعَمَا أَهْلَهَا فَأَتَوْا أَنْ يُصَيِّفُوهُمَا فَوَجَدَا فِيهَا جِدَارًا يُرِيدُ أَنْ يَنْقُضَ فَآقَامَهُ، قَالَ لَوْ شِئْتُ لَتَحَدَثَ عَلَيْهِ أَجْرًا ﴿٧٧﴾

78. wuxuu yidhi kan waa kala tagii dhexdeenna, waxaana kaaga warrami fasiraadda waxaadan karin inaad ku samirto.

قَالَ هَذَا فِرَاقُ بَيْنِي وَبَيْنَكَ سَأُتِيكَ بِتَأْوِيلِ مَا لَمْ تَسْتَطِعْ عَلَيْهِ صَبْرًا ﴿٧٨﴾

79. markabka waxaa lahaa masaakiin ka shaqeeya badda waxaana doonay inaan Ceebeeyo waxaana ahaa hortooda xaakim ka qaata doon kasta (oo fayow) dhaca.

أَمَّا السَّفِينَةُ فَكَانَتْ لِمَسْكِينٍ يَعْمَلُونَ فِي الْبَحْرِ فَأَرَدْتُ أَنْ أَعِيبَهَا وَكَانَ وَرَاءَهُ مَلِكٌ يَأْخُذُ كُلَّ سَفِينَةٍ غَصْبًا ﴿٧٩﴾

80. Wiilkana waxay ahaayeen labadiisii waalid mu'miniin waxaana ka cabsannay inuu ku mashaqeyyo xadgudub iyo (gaalimo).

وَأَمَّا الْعَالِمُ فَكَانَ آبَاؤَهُ مُؤْمِنِينَ فَخَشِينَا
أَنْ يُرْهِقَهُمَا طُغْيَانًا وَكُفْرًا ﴿٨٠﴾

81. waxaana doonnay inuu ugu badalo Eebahood mid ka khayrroon daahirnimo iyo u dhawi naxariis.

فَأَرَدْنَا أَنْ يُبَدِّلَهُمَا تَرْغُبًا وَرُكُودًا
وَاقْرَبَ رُحْمًا ﴿٨١﴾

82. darbigana waxaa leh labo wiil oo agoon ah oo magaalada, waxaana hoostiisa ah kansi ay leeyihiin wuxuuna ahaa aabahood mid suuban, wuxuuna doonay Eebahaa inay gaadhaan xoogooda lana baxaan kansigooda naxariista Eebahaa dartiis, uma falin ra'yigayga kaasi waa fasirka waxaad karin samirkiisa*.

وَأَمَّا الْجِدَارُ فَكَانَ لِغُلَامَيْنِ يَتِيمَيْنِ فِي الْمَدِينَةِ
وَكَانَ تَحْتَهُ كَنْزٌ لَهُمَا وَكَانَ أَبُوهُمَا صَالِحًا فَأَرَادَ
رَبُّكَ أَنْ يُبَدِّلَهُمَا تَرْغُبًا وَرُكُودًا
رَحْمَةً مِنْ رَبِّكَ وَمَا فَعَلْتُهُ عَنْ أَمْرِي ذَلِكَ تَأْوِيلُ
مَا لَمْ تَسْطِعْ عَلَيْهِ صَبْرًا ﴿٨٢﴾

way socdeen muuse iyo khadir intay ka yimaadaan magaalo oyna warsadeen cunno, wayna u diideen markaasay arkeen darbi dhacaya waxaana toosiyeey khadir. markaasuu yidhi muuse maad ujuuro ka qaadatid, markaasuu yidhi khadir halkan waa meeshaan ku kala tagaynay, wuxuuna u fasiray arrimihii uu soo mariyey oo ah in markabka masaakiin lahayd kuna dhawaa xaakim xooga doonta fiican saasna u waxyeelleeyey. yarkuna ma fiicnay wuuna dilay si uusan u gaalayn waalidka, darbigana agoon aabahood wanaagsanaa yaa lahaa waxaana ku hoos jiray kansi si ay ula baxaan, arrimahaasna waxay ku dhaceen idamka Eebe, taasina waxay ku tusin in Eebe ogyahay maslaxadda iyo waxa wanaagsan dadkase waxaa la faray wanaag iyo camal fiican. Al-Kahf (77-82).

* Qisadan kuma tusineeyso in ay u bannaantahay qof inuusan ku dhaqmin sharciga islaamka isagoo sheeganayo cilmi qarsoon oo la siiyay darteed, waayo khadar wuxuu ahaa Nabi loo waxyoonaayay sida uu u yidhi «kama sameeyn ra'yigeeyga» waxaad ogtahay in aan Nabigeenna Nabi ka dambeeyn; culumadana waxay ku Xukmiyeen gaalnimu qofkii saas sheegta, mana jiro cilmi baadhin iyo cilmidaahir (dib u eegaha).

83. waxay ku warsan Dul qarnayn xaggiisa waxaad dhahdaa waxaan idin-ku akhrin xaggiisa war (waxyi).

وَيَسْأَلُونَكَ عَنِ الْقُرْآنِ قُلْ سَأَتْلُوا عَلَيْكُمْ مِنْهُ
ذِكْرًا ﴿٨٣﴾

84. anagaa makaninay (siinnay) xukun dhulka waxaana u siinnay wax kasta sabab (cilmi).

إِنَّا مَكِّنَّا لَهُ فِي الْأَرْضِ وَءَاتَيْنَاهُ مِنْ كُلِّ شَيْءٍ سَبَبًا ﴿٨٤﴾

85. wuxuuna raacay waddo.

فَاتَّبَعَ سَبَبًا ﴿٨٥﴾

86. markuu gaadhay qorrax u dhacna wuxuu helay iyadoo ku dhici il dhoobo ah (muuqaalka) wuxuuna ka helay agteeda qoom, waxaana nidhi Dul

حَتَّىٰ إِذَا بَلَغَ مَقْرَبَ الشَّمْسِ وَجَدَهَا تَغْرُبُ فِي عَيْنٍ
حَمِئَةٍ وَوَجَدَ عِنْدَهَا قَوْمًا قُلْنَا يَا أَيُّ الْقُرُونِ يَمَّا أَنْ تَغْرُبَ
وَأَمَّا أَنْ تَنَجَّدَ فِيهِمْ حَسْبًا ﴿٨٦﴾

qarnaynow waa inaad cadaabto ama ka yeelato wanag.

87. wuxuuna yidhi ruuxii dulmi fala waannu cadaabi (ciqaabi) markaasaa loo celin Eebihiis wuuna cadaabi cadaab daran.

قَالَ أَمَّا نَنْتَقِمُ عَنْكَ فَمَا نَسْتَفِئُكَ مِنْ عَذَابِنَا إِنَّكَ لَرَبُّنَا
فَعَذَابُنَا لَعَذَابُ الْكَافِرِينَ ﴿٨٧﴾

88. ruuxiise rumeeya oo fala wanaag wuxuu mudan abaal fiican waxaana u dhihi amarkannaga fudayd.

وَأَمَّا مَنْ ءَامَنَ وَعَمِلَ صَالِحًا فَلَهُ جَزَاءُ الْحَسَنَىٰ
وَسَنَقُولُ لَهُ مِنْ أَمْرِنَا يُسْرًا ﴿٨٨﴾

89. markaasuu raacay waddo.

فَوَاتَّبَعِ سَبِيلًا ﴿٨٩﴾

90. markuu gaadhay qorrax ka soo baxna wuxuu helay iyadoo ku soo baxda qoom aanaan yeelin sokeydeeda asturaad.

حَتَّىٰ إِذَا بَلَغَ مَطْلِعَ الشَّمْسِ وَجَدَهَا تَطْلُعُ عَلَىٰ قَوْمٍ لَمْ
يَجْعَلْ لَهَا مِنْ دُونِهَا كِسْفًا ﴿٩٠﴾

91. waa sidaas, waxaan ku koobnay waxa agtiisa ah ogaansho.

كَذَٰلِكَ وَقَدْ أَحَطْنَا بِمَا لَدَيْهِ خُبْرًا ﴿٩١﴾

qisada dul qarnayn iyo in Eebe siiyey xukun ballaadhay oo gaadhay bari iyo galbeed iyo waxyaaluhuu la kulmay waa in ruuxa muslimka ah rumeeyaa illeen quraanka sheegay Eebana wuxuu doono wuu falaa, waxaana quraanka ka muuqata inuu ahaa nin wanaagsan oo xaqa rumeeyey. arrinta la sheegi oo ah inuu ahaa kii dhisay iskandiriyada masar oon mu'min ahayn waxaa diidi waxaan soo sheegnay iyo in culimada islaamku sheegeen inuu ahaa nin mu'min ah oo joogay waqtigii nabi Ibraahim, mana wanaagsana in lagu dagdago taariikhda inta layaqiinsado, mana bannaana in war kale laga horkeeno quraanka oo la dhaho saasuu sheegi quraandu xaalkuna waa saas, ruuxa rumeeyey waa inuu raaco quraanka kaan rumeynna loo sheego hadduu rumeeyana wanaag haddii kalana wuu khasaaray. Al-Kahf (83-91).

92. markaasuu raacay waddo.

فَوَاتَّبَعِ سَبِيلًا ﴿٩٢﴾

93. markuu gaadhay labada xidhmo dhexdooda wuxuu ka helay hortooda qoom aan garanayn hadal (af gaar ah ku hadla).

حَتَّىٰ إِذَا بَلَغَ بَيْنَ السَّدَّيْنِ وَجَدَ مِنْ دُونِهِمَا قَوْمًا
لَا يَكَادُونَ يَفْقَهُونَ قَوْلًا ﴿٩٣﴾

94. waxayna dheheen dul qarnaynow yaajuuj iyo maajuuj waxay fasaadin dhulka ee ma kuu yeellaa ujuuro inaad yeesho dhexdanada xidheen jidaar.

قَالُوا يَا أَيْدَا الْقُرَيْنِ إِنَّا يَا جُوجَ وَمَا جُوجَ مُفْسِدُونَ
فِي الْأَرْضِ فَهَلْ نَجْعَلُ لَكَ حَرْجًا مَعَ أَنَّا نَجْعَلُ بَيْنَنَا
وَبَيْنَهُمْ سَدًّا ﴿٩٤﴾

95. wuxuu yidhi wuxuu imakaniyey (isiyey Eebahay yaa ka khayrroon ee iigu caawiya xoog aan yeelo dhexdiinna xidheene.

قَالَ مَا مَكَّنِّي فِيهِ رَبِّي خَيْرٌ فَأَعْبُو فِي نُفُوسِكُمْ
وَأَعْبُوهُمْ رَدْمًا ﴿٩٥﴾

96. i siiya goosimo bir ah, markuu ekeeyey labada dhinac dhexdooda wuxuu yidhi afuufa* markuu ka yeelay dabna wuxuu yidhi i siiya aan ku shubee maar la dhalaaliyey.

ءَأُوْفِي زُبَيْرَ الْحَدِيدِ طَيِّحًا إِذَا سَأَلَنِي بَيْنَ الصَّدَقَاتِ قَالَ أَنْفَحُوا
حَتَّى إِذَا جَعَلَهُ نَارًا قَالَ ءَأُوْفِي أَوْعٍ عَلَيْهِ قِطْرًا ﴿٣٦﴾

97. mana karayaan inay ka soo kor baxaan (ka soo dhacaan) mana karayaan inay duleeliyaan.

فَمَا اسْتَطَعُوا أَنْ يَظْهَرُوهُ وَمَا اسْتَطَعُوا لَهُ نِقَابًا ﴿٣٧﴾

98. wuxuuna yidhi kan waa naxariis Eebahay, Markuu yimaaddo yabooha Eebahayna wuxuu ka yeelaa burbur, yabooha Eebahayna waa xaq (sugan).

قَالَ هَذَا رَحْمَةٌ مِنْ رَبِّي فَإِذَا جَاءَ وَعْدُ رَبِّي جَعَلَهُ دَكَّاءَ
وَكَانَ وَعْدُ رَبِّي حَقًّا ﴿٣٨﴾

waxaa socotay qisadii Dul qarnayn intuu ka gaadho jidaar xidhan oo ku agnoolyihiin dad af gaar ah ku hadli oon saas loo garanayn kana cawday juuj iyo maajuuj oo ah kuwo fassdin dhulka oyna ka codsadeen inuu jidaar adag dhexyeelo oy waxna siiyaan wuxuuse u sheegay in Eebe siiyey wax ka roon waxooda kana codsaday inay xoog ku kaalmeeyaan una keenaan biro, markuu ekeeyeyna uu ku shubay maar iyo bir la dhalaaliyey kamana soo bixi karaan, waana naxariis Eebe markuuse yimaaddo yabooha Eebe wuu burburiyaa, waana xaq yaboohiisu. rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu ku yidhi xadiith dheer: waxaa dhexdiinna ah (qiyaamada) laba umadood oo waxay ahaadaanba badiya, yaajuuj iyo wamaajuuj waana waajib in la rumeeyo jiridooda haseyeeshee xaggee iyo sidee wax ma tarto. Al-Kahf (92.98).

*buufiya.

99. waxaannu ka yeeli qaarkood maa-lintaas kii qaarka (kale) dhexgali waxaana la afuufaa suurka waana soo kulminnaa kulmin.

*وَتَرَكْنَا بَعْضَهُمْ يَوْمَئِذٍ يَمُوجُ فِي بَعْضٍ وَنُفِخَ فِي الصُّورِ
فَجَمَعْتَهُمْ جَمْعًا ﴿٣٩﴾

100. waxaana u bandhigaynaa jahanna-mo maalintaa gaalaada bandhig.

وَعَرَّضْنَا جَهَنَّمَ يَوْمَئِذٍ لِلْكَافِرِينَ عَرَضًا ﴿٤٠﴾

101. waana kuway indhaoodu yihiin dabool dhexdiis xagga xuskayga mana aha kuwo kara (maqalka) xaqa.

الَّذِينَ كَانَتْ أَعْيُنُهُمْ فِي غَطَاةٍ عَنْ ذِكْرِي وَكَانُوا
لَا يَسْمَعُونَ سَمْعًا ﴿٤١﴾

102. ma waxay u maleeyeen kuwii gaaloobay inay ka yeesheen addooma-dayda iga sokow awliyo (tu anfici inay tahay, saas ma aha arrintu) waana u darabnay jahannamo gaalada dagid.

أَفَحَسِبَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَنْ يَتَّخِذُوا عِبَادِي مِنْ دُونِ آلِهَاتِهِ
إِنَّا أَعْتَدْنَا لَهُمْ لِلْكَافِرِينَ نُزُلًا ﴿٤٢﴾

103. waxaad dhahdaa ma idiin warra-maa duwa khasaaro badan camallo.

قُلْ هَلْ نَسَبْتُكُمْ بِالْأَحْسَنِ مِنْ أَعْمَالِكُمْ ﴿٤٣﴾

104. waa kuwuu dhumay camalkoodu nolosha adduun iyagoo isuna malayn inay wanaajin camalka.

الَّذِينَ صَلَّوْا سَعْيُهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَهُمْ يُحْسِبُونَ
أَنَّهُمْ يُحْسِبُونَ صُبْحًا ﴿١٥٠﴾

105. kuwaasu waa kuwa ka gaaloobay aayaadka Eebahood iyo la kulankiisa oo buray camalkoodu umana joojinno maalinta qiyaame miisaan «qimmana ma leh».

أُولَئِكَ الَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِ رَبِّهِمْ وَلِقَائِهِمْ فَحَبَّطَتْ
أَعْمَالُهُمْ فَلَا نُقِيمُ لَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَزَنًا ﴿١٥١﴾

106. kaasina waa abaalkoodii jahannamo'gaalnimadooda darteed, waxayna kayeesheen aayaadkayga iyo rasuulla-dayda jeesjees.

ذَٰلِكَ جَزَاءُ الْفٰسِقِينَ ۖ يَمَّا كَفَرُوا وَالَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ وَرُسُلًا
هُرُّوا ﴿١٥٢﴾

Maalinta qiyaame waa maalin dhibaato badan cidii Eebe ka fududeeyo mooyee, waana maalin la kulmin dadka oyna is dhexqaadi iskuna wareeri, gaaladana lguu kulmin naarta, kuwaasoo ah kuwa xaqa ka indha beelay oon maqlayna, gaalada Eebe ka sokow waxay caabudaan yeeshayna waxaa loo darbaya naarta jahannamo. kuwa ugu khasaara badanna waakuwa camalkoodu ku dhumay adduunda isuna malayn inay wanaag fali, dana gaaloobay quraanka, iyo lakulanka Eebe, wax qiima ahna loo yeeli maayo qiyaamada, illeen way gaaloobeen ooy ku jeesjeeseen quraanka iyo rasuulkaba, nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe kokiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa la keeni qiyaamada nin wayn oo shiis oon u miisaanmayn garab kaneeeco. Sacad binu waqaasna waxaa laga wariyey kuwa ugu khasaaro badan camal waa yuhuud iyo nasaaro. waxayna ku tusin in la digtoonaa oo la toosnaado.

Al-Kahf (99-106).

107. kuwa rumeeyey (xaqa) oo fala camal fiican waxay u ahaatay jannada firdowso degid. (martiqaad).

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ كَانَتْ لَهُمْ جَنَّاتُ
الْفِرْدَوْسِ نُزُلًا ﴿١٥٣﴾

108. wayna ku waari dhexdeeda mana doonaan inay xaggeeda ka wareegaan (guuraan).

خَالِدِينَ فِيهَا لَا يَدْخُلُونَهَا أَحَدٌ ﴿١٥٤﴾

109. waxaad dhahdaa hadday u noqoto badda khad kalimooyinka Eebahay waxaa dhammaan lahaa badda ka hor dhammaanshaha kalimaadka Eebahay aaban keenno isagoo kale (oo siyaadin ah).

قُلْ لَوْ كَانُوا بِالشُّرُوعِ إِذًا لَكُنْتُمْ رَبُّ لَقَدْ أَلْبَسْنَا لِكُلِّ
أَن تَنْفَعَكَ كَلِمَتُ رَبِّي وَلَوْ جِئْنَا بِمِثْلِهِ مَدَدًا ﴿١٥٥﴾

110. waxaad dhahdaa waxaan uun ahay anigu bashar (dad) idinkoo kale ah, waxaa laywaxyooday in uun yahay ilaahii ilaah kaliya, ruuxiise dooni la kulanka Eebihiis ha falo camal fiican,

قُلْ إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُوحَىٰ إِلَيَّ أَنَّمَا إِلَهُ الْكَافِرِينَ
فَمَنْ كَانَ يَرْجُوا لِقَاءَ رَبِّهِ فَلْيَعْمَلْ عَمَلًا صَالِحًا
وَلَا يُشْرِكْ بِرَبِّهِ أَحَدًا ﴿١٥٦﴾

yuuna la wadaajinna cibaadada Eebi-
hiis cidna.

Mu'iniinta camalka fiican wuxuu eebe u darbay jannada firdowsa oyna ku waari ka guuridna ayna doonayn, sida adduunka la dooni in marba meel loo guuro ama loo wareego, rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: haddaad Eebe warsataan janno warsada jannada firdowsa waa jannada ugu sareysa uguna wanaagsan, kana soo burqadaan wabiyada jannada, (bukhaari iyo muslim).

markaas waxay suuraddu ku dhamaatay waasacnimada cilmiga Eebe iyo inuusan dhammaanayn haddii geedaha qalin laga dhigo sida suurad kale caddaysay, badahana khad laga dhigo. nabiguna waa dad hase yeeshee loo waxyooday in Ilaah kali yahay loona kaliyeelo camalka cid kalana lala wadaajin.

Rabiic binu anas wuxuu yidhi: cilmiga dadka dhammaan marka loo eego cilmiga eebe wuxuu la mid yahay dhibic badahoo dhan. (xaakim).

Taasina waxay ku tusin inaan cidna cilmi ku faani karin'sheeganna karin. rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: markuu Eebe kulmiyo kuwii hore iyo kuwii dambaba maalin aan shaki lahayn waxaa dhawaaqa dhawaaqe ruuxii la wadaajiyey camal Eebe cid kale ha ka doonto abaalkiisa, Eebe waa ka kaaftoonyahay wadaage. (imaam axmed). waxaa uun loo baahanyahay waa camal fiican oo Eebe dartiis loo falo si Eebe abaal wanaagsan looga helo. Al-Kahf (107-110).



Suurat Maryam

سُورَةُ مَرْيَمَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. waa la soo sheegay kuwo lamid ah.

كَمْ هِيَ عَصَ ①

2. (kanna) waa sheegid naxariista Eebahaa addoonkiisa zakariye.

ذِكْرَ رَحْمَتِ رَبِّكَ عَبْدَهُ زَكَرِيَّا ②

3. markuu uudhawaaqay Eebihiis dha-waaq qarsoodi ah.

إِذْ نَادَى رَبَّهُ رِنْدًا خَفِيًّا ③

4. yidhina Eebow anigu waan tabarya-raaday madaxayguna wuxuu la huray cirro, Mana ahayn baryadaada Eebow mid ku khasaara.

قَالَ رَبِّ إِنِّي وَهَنَ الْعَظْمُ مِنِّي وَأَشْتَعَلَ الرَّأْسُ شَيْبًا وَلَمْ أَكُنْ بِدُعَائِكَ رَبِّ شَقِيًّا ④

5. anigu waxaan ka cabsan qaraabada iga dambaysa (inay xumaadaan) haweenaydayduna waa madhasho, iga sii agtaada wali (walad).

وَإِنِّي خِفْتُ الْمَوَالِيَ مِنْ وَرَائِي وَكَانَتِ امْرَأَتِي عَاقِرًا فَهَبْ لِي مِنْ لَدُنْكَ وَلِيًّا ⑤

6. i dhaxla (nabinimada) oo dhaxla ehelkii yacquub kana yeel Eebow mid laga raalli noqdo.

يَرْبُؤْنِي وَيَرْبِتُ مِنْ آلِ يَعْقُوبَ وَأَجْعَلْهُ رَبِّ رَضِيًّا ⑥

7. zakariyow annagu waxaanu kuugu bishaarayn wiil magaciisu Yahay yaxye oonaan u yeelin horay wax lamid ah (lamagac ah).

يَذَرِكُ يَا إِنَّا نَبِيْرُكَ يُغَالِبُ اسْمُهُ يَحْيَى لَمَّا جَعَلْ لَهُ مِنْ قَبْلُ سَمِيًّا ⑦

8. wuxuu yidhi Eebow sidee iigu ahaan wiil iyadooy tahay haweeneydaydu madhasho oon ka gaadhay waynida gabow.

قَالَ رَبِّ أَنَّى يَكُونُ لِي غُلَامٌ وَكَانَتِ امْرَأَتِي عَاقِرًا وَقَدْ بَلَغْتُ مِنَ الْكِبَرِ عِتِيًّا ⑧

9. Wuxuu yidhi waa saas, wuxuuna Rabbigaa Yidhi:abuurridda (Yaxye) way ii fuddahay waana ku abuuray horay adoon ahayn waxba.

قَالَ كَذَلِكَ قَالَ رَبُّكَ هُوَ عَلَيَّ هَيِّئٌ وَقَدْ حَلَقْتُكَ مِنْ قَبْلُ وَلَمْ تَكُنْ شَيْئًا ⑨

nabi zakariye yaa Eebe waydiistay isagoo wayn haweenaydiisuna dhalin in Eebe siiyo cid wanaagga iyo nabinimada ka dhaxasha, Eebana wuu aqbalay baryadiisii wuxuuna siiyey wiilkiisii nabi yaxye, markuu la yaabay xaalkiisa iyo kan ehelkiisa wuxuu Alle u sheegay inay u fududdahay illeen isagaba wuxuu abuuray isagoon waxaba ahaync.

waxaa sugnaaday inaan nabiyada laga dhaxlin xoolo ee laga dhaxlo cilmi. tan kale waxay ku tusin in Eebe aqbalay baryada addoomadiisa, wax walbana u fududayahay hadduu doono, iyo in loo cabsado diinta iyo wanaagga iyo xaqa. Maryam (1-9).

10. wuxuu yidhi Eebow ii yeel calaamo (xaqnimada yaboohaada) wuxuu yidhi (Eebe) calaamadaadu waa inaad la hadlin dadka seddex habeen oo israacsan (adoo fayow).

قَالَ رَبِّ اجْعَلْ لِي آيَةً ۗ قَالَ آيَاتُكَ أَلَّا
تُكَلِّمُ الْنَّاسَ تِلْكَ لَيَالٍ سَوِيًّا ۝١٠

11. markaasuu ugaga soo baxay qoomkiisii mixraabka wuxuuna u ishaaray xaggooda inay tukadaan aroor iyo galabba.

فَخَرَجَ عَلَى قَوْمِهِ مِنَ الْمِحْرَابِ فَأَوْحَىٰ إِلَيْهِمْ أَن
سَبِّحُوا بُكْرَةً وَعَشِيًّا ۝١١

12. (waxaa loo yidhi) yaxyow ku qaado kitaabka (tawreed) xoog (dadaal) wa-xaan siinnay xigmo isagoo yar.

يَبِّحْ لِي خِذْ الْكِتَابَ بِقُوَّةٍ وَّآتِنَاهُ
الْحُكْمَ صَبِيًّا ۝١٢

13. iyo naxariis agtanada ka ahaatay iyo daahirnimo wuxuuna ahaa dhawrsade.

وَحَنَانًا مِّن لَّدُنَّا وَزَكَاةً ۖ وَكَانَ تَقِيًّا ۝١٣

14. iyo baarri labadiisa waalid mana ahayn daalim caasi ah.

وَيَسَّرَ لِدَوْلَيْهِ وَلَمْ يَكُن جَبَّارًا عَصِيًّا ۝١٤

15. nabadgalyo korkiisa ha ahaato maalinta la dhalay iyo maalintuu dhi-man iyo maalinta la soo bixin isagoo nool.

وَسَلَّمَ عَلَيْهِ يَوْمَ وُلِدَ وَيَوْمَ يَمُوتُ وَيَوْمَ يُبْعَثُ
حَيًّا ۝١٥

16. (ku xusuuso) kutaabka maryama, markay uga fogaatay ehelkeeda meel bari ah, (bariga qudsi).

وَأَذْكُرُ فِي الْكِتَابِ مَرْيَمَ إِذِ انْتَبَذَتْ مِنْ أَهْلِهَا
مَكَانًا شَرِيًّا ۝١٦

17. oyna ka yeelatay xaggeeda astur, oon u dirray xaggeeda ruuxannagii (jibriil), oo isugu shabahay dad eg.

فَاتَّخَذَتْ مِنْ دُونِهِمْ حِجَابًا فَأَرْسَلْنَا إِلَيْهَا
رُوحَنَا فَتَمَثَّلَ لَهَا بَشَرًا سَوِيًّا ۝١٧

18. una tidhi anigu waxaan kaa magan galay (Eebaha) Raxmaan ah haddaad tahay dhawrsade.

قَالَتْ إِنِّي أَعُوذُ بِالرَّحْمَنِ مِنْكَ إِنْ كُنْتَ تَقِيًّا ۝١٨

19. kuna yidhi anigu waxan uun ahay rasuulka Eebahaa inaan ku siiyo wiil daahir ah.

قَالَ إِنَّمَا أَنَا رَسُولُ رَبِّكِ لِأَهَبَ لَكِ غُلَامًا
رَّحِيمًا ۝١٩

20. waxayna tidhi sidee iigu agaan wiil anoosan i taaban dad, ahaynna mid xun (la tuhmo).

قَالَتْ أَنَّى يَكُونُ لِي غُلَامٌ وَلَمْ يَمَسِّنِي بَشَرٌ
وَلَمْ أَكُ بَغِيًّا ۝٢٠

21. wuxuuna yidhi waa sidaas, wuxuuna yidhi Eebahaa wuu u fududyahay korkayga iyo inaan uga yeello calaamad dadka iyo naxariis xagayga ah waana arrin la xukumay (dhammeeyey).

قَالَ كَذَلِكَ قَالَ رَبُّكَ هُوَ عَلَىٰ هَٰئِنٌ
وَلَيَجْعَلُهُ آيَةً لِّلنَّاسِ وَرَحْمَةً مِنَّا
وَكَانَ أَمْرًا مَّقْضِيًّا ۝٢١

zakariye wuxuu Eebe warsaday in calaamo loo yeelo arrinkaas, wuxuuna aamusnaa saddex habeen, wuxuuna ku hadlayey ishaaro, waxaana la siiyey yaxye kitaab iyo xigmo, naxariis iyo daahirimo wuxuuna ahaa dhawrsade, u ah baarri labadiisa waalid, mana ahayn madax adke caasi ah, Eebana waa nabadgaliyey maalintii la dhalay, tuu dhiman iyo maalinta la soo bixin isagoo nool. Maryama qasadeedu waxay ahayd mid wayn, waxayna dhanka bari ee qudsi ugaga qarsoontay dadkeedii, waxaana u yimid jibriil oo bashar ku shabahan waxayna ka magan gashay Eebe, wuxuuna u sheegay in Eebe u soo diray si uu wiil u siiyo, wayse yaabtay siday u heli wiil iyadoon nin qabin, mid xun oo suuqa gashana ahayn, Eebaase u sheegay in awoodda Eebe u fududahay yahayna xaal dhamaysan. waana soo sheegay in si dhab ah oo nadiif ah loo rumeeyo arrintan inagoo ka duwan yohuud halaag ha ku dhacce. Illeen Rabbiga xaqa ah yaa si xaq ah uga warramayee. Maryam (10-21).

22. way xambaartay (uurowday) waxayna u fogaatay meel dheer (durug-san).

۞ فَحَمَلَتْهُ فَانْتَبَدَتْ بِهِ ۖ مَكَانًا قَوِيًّا ۝٢٢

23. waxayna u dhibaataysay fooshii jirrid timir waxayna tidhi shalleytee maan dhinto ka hor arrintan oon noqdo mid la halmaamo o laga tago.

فَأَجَاةَ هَا الْمَخَاضِ إِلَىٰ جِذْعِ النَّخْلَةِ قَالَتْ
يَلَيْتَنِي مِثُّ قَبْلِ هَذَا وَكُنْتُ نَسِيًّا
مَنْسِيًّا ۝٢٣

24. wuxuuna uga dhawaaqay hoosteeda ha murugoonin wuxuu yeelay Eebehaha hoostaada wabi (yar).

فَنَادَاهَا مِن تَحْتِهَا أَلَّا تَحْزَنِي قَدْ جَعَلَ رَبُّكَ
تَحْتِكَ سَرِيًّا ۝٢٤

25. una gilgil xaggaaga jirrida timirta ha kuu soo riddo korkaaga timir (curdana) oo fiicane.

وَهُزِّي إِلَيْكِ بِجِذْعِ النَّخْلَةِ تُسَاقِطُ عَلَيْكَ رَطْبًا
جَنِيًّا ۝٢٥

26. ee cun oo cab qabowsana il (farax) haddaad ka aragto dadkana ruux waxaad dhahdaa anigu waxaan ugu nadray (Eebaha) Raxmaan oon u soomi oonan la hadlin maanta cidna.

فَكُلِّي وَأَسْرِبِي وَقَرِّي عَيْنًا ۖ فَمَا تَرَوْنَ مِنَ الْمَنَسْرِ
أَحَدًا أَقْرَبُ إِلَيَّ نَذَرْتُ لِلرَّحْمَنِ صَوْمًا فَلَنْ
أَكِيدَ الْيَوْمَ إِسْنِيًّا ۝٢٦

27. waxayna ula timid ciise qoomkeeda iyadoo xambaarsan waxayna dheheen maryamoy waxaad la timid wax wayn.

قَالَتْ بِهِ قَوْمَهَا تَحْمِلُهُ ۗ قَالُوا لِمَ تَصْرَفُهُ لَقَدْ جِئْتِ
شَيْئًا فَرِيًّا ۝٢٧

28. haaruun walaashiisay (u eg wanaag-ga) ma eheyn aabahaa ruux xun, mana ahayn hooyadaa mid xun (la tuhmo).

بِتَأْخُذْتَ هَلْوَءَ مَا كَانَ أَبُوكَ أَمْرًا سَوَاءً وَمَا
كَانَتْ أُمَّكَ بَعِيًا ٢٨

29. wayna u ishaartay xaggiisa waxayna dhaheen sideen ula hadlaynaa ruux ku sugan Sariirilmood isagoo yar.

فَأَشَارَتْ إِلَيْهِ قَالُوا كَيْفَ تُكَلِّمِينَ مَنْ كَانَ فِي
الْمَهْدِ صَبِيًا ٢٩

wuxuu Eebe kaga warramay aayadahan inay maryan urowday nabi ciise, oyna ka fogaatay qoomkeedii, ka dibna fooshii ku qabatay timir agteed, markaas jeclaatay inay dhimatoo la halmaamo, waana loo dhawaaqay, inayan walbahaarin, geedka timirta ahna ay lusho si midho uga soo daataan, waxaan loogu yeedhay inay ka cunto kana cabto togga, hadday aragto dadna ayan la hadlin, waxayna ula timid qoomkeedii iyadoo xambaarsan, waxayna dhaheen maryamoy waxaad la timid wax wayn, aabahaa iyo hooyadaa midna ma xumayn, waxayna u ishaartay inay yarka la hadlaan iyagoo leh seen ula hadlaynaa ilmo sariirta jiifa. Waxaan soo sheegnay inay waajibtahay in awoodda eebe la rumeeyo loona hogaansamo Eebe iyo sharciyiisa. Maryam (22 - 29).

30. wuxuuna yidhi (ciise) anigu waxaan ahay addoon Eebe, wuxuuna i siiyey kitaabka (injiil) wuxuuna iga yeelay nabi.

قَالَ إِنِّي عَبْدُ اللَّهِ آتَانِيَ الْكِتَابَ وَجَعَلَنِي نَبِيًّا ٣٠

31. wuxuuna iga yeelay mid la barakeeyey meel kastoon ahay, wuxuuna ii dardaarmay salaadda iyo zakada intaan noolahay.

وَجَعَلَنِي مُبَارَكًا أَيْنَ مَا كُنْتُ وَأَوْصَانِي
بِالصَّلَاةِ وَالزَّكَاةِ مَا مُمْتَحِنًا ٣١

32. wuxuuna iga yeelay baarriga waali-daday (hooyaday) igamana yeelin ma-dax adage xun.

وَبَرًّا بِوَالِدَاتِي وَآمَرْتَنِي بِاتِّبَاعِهَا
فَتَتَّبِعُهُنَّ وَخَشَوْتُ اللَّهَ إِذْ أَحْبَبْتُ ٣٢

33. nabadgalyana ahaato korkayga maalintii lay dhalay iyo maalintaan dhiman iyo maalinta laysoo bixin anoo nool.

وَأَسْلَمْتُ عَلَىٰ يَوْمٍ وُلِدْتُ وَيَوْمَ أَمُوتُ وَيَوْمَ
أُبْعَثُ حَيًّا ٣٣

34. kaasi waa Ciise ibnu maryama, waana hadalka xaqa ah ee ay shakin.

ذَٰلِكَ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ قَوْلَ الْحَقِّ الَّذِي فِيهِ
يَمْتَرُونَ ٣٤

35. kuma haboona Eebe inuu yeesho ilmo, waana ka nasahanyahay, markuu doono xukun «amar» wuxuu uun dha-haa ahaw wuuna ahaan.

مَا كَانَ لَهُ أَنْ يَتَّخِذَ مِنْ وَلَدٍ سُبْحَانَهُ إِذَا قَضَىٰ أَمْرًا
فَأَلَّمَ يَقُولُ لَهُ مَن كَانَ فِي كُوفٍ ٣٥

36. Ilaahay waa Eebahay iyo Eebihin ee caabuda, kaasaa ah jidka toosane.

وَإِنَّ اللَّهَ رَبِّي وَرَبُّكُمْ فَاعْبُدُوهُ هَذَا صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ ٣٦

37. wayse iskhilaafeen xisbiyadii dhex-

فَأَخْتَلَفَ الْأَحْزَابُ مِنْ بَيْنِهِمْ فَوَيْلٌ لِلَّذِينَ كَفَرُوا

dooda wuxuuna halaag uga sugnaaday
kuwii gaalobay kulan maalin wayn.

مِن مَّشْهُودٍ يُوعَظُ بِهِ ﴿٣٧﴾

38. maqli ogaa oo arki ogaa maalintay
noo imaan, hase yeeshee daalimiintu
maanta waxay ku suganyihiin baadi
cad.

أَسْمِعْ بِهِمْ وَأَبْصِرْ يَوْمَ يَأْتُوتَنَّا لَكِنِ الظَّالِمُونَ الْيَوْمَ
فِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ ﴿٣٨﴾

39. uga dig iyaga maalin qoomamo,
marka la xukmin amarka iyagoo kusu-
gan halmaansho oon rumeynayn.

وَأَنْذِرْهُمْ يَوْمَ الْحَسْرَةِ إِذْ قُضِيَ الْأَمْرُ وَهُمْ فِي غَفْلَةٍ وَهُمْ
لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٩﴾

40. annagaa dhaxli dhulka iyo waxa
korkiisa ah xagganagaana laydiin soo
celin.

إِنَّا نَحْنُ نُرِثُ الْأَرْضَ وَمَنْ عَلَيْهَا وَإِنَّا يُرْجَعُونَ ﴿٤٠﴾

Eebaa ka hadliiyeey nabi ciise, wuxuuna sheegay inuu yahay addoon Eebe oosan ahayn Ilaah, kitaabna siiyey nabina ka higay, barakeeyeyna meelkastoos joogo, farayna salaadda iyo zakada intuu noolyahay iyo baarrinimada hooyadiis, ahayna mid xun, nabad geliyeyna meel kasta uu ahaan, qiisadiisuna waa xaq, Eebana waa ka nasahanyahay ilmo yeelasho, wax waibana waa u dudud yahay, Eebana waa waaxid, inkastooy gaaladu isku khilaaftay oo halaag u sugnaan qiyaamada, oyna aad wax u maqli una arki maalinta qiyaame ee Eebe u hadhi wax kasta. Maryam (30-40).

41. ku sheeg kitaabka (Nabi) Ibraahim,
wuxuu ahaa runbadane nabi ah.

وَأَذْكُرْ فِي الْكِتَابِ إِبْرَاهِيمَ إِنَّهُ كَانَ صِدْقًا نَّبِيًّا ﴿٤١﴾

42. markuu ku yidhi aabihiis aabbow
maxaad u caabudi waxaan maqlayn
waxna arkayn kaana deeqayn waxba.

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ يَا أَبَتِ لِمَ تَعْبُدُ مَا لَا يَسْمَعُ وَلَا يُبْصِرُ
وَلَا يُغْنِي عَنْكَ شَيْئًا ﴿٤٢﴾

43. aabbow aniga waxaa ii yimid cilmi
waxaan adi kuu imaanin ee I raac aan
dugu hanuuniyo jid toosane (xaqa).

يَا أَبَتِ إِنِّي قَدْ جَاءَنِي مِنَ الْعُلَمَاءِ مَا لَمْ يَأْتِكَ فَاتَّبِعْنِي
أَهْدِكَ صِرَاطًا سَوِيًّا ﴿٤٣﴾

44. aabbow ha caabudin shaydaan,
shaydaanku wuxuu u yahay Eebaha
Raxmaan ah caasi.

يَا أَبَتِ لَا تَعْبُدِ الشَّيْطَانَ إِنَّ الشَّيْطَانَ كَانَ لِلرَّحْمَنِ
عَصِيًّا ﴿٤٤﴾

45. aabbow anigu waxaan ka cabsan
inuu ku taabto cadaabka Eebaha rax-
maan ah ood u noqoto shaydaan
qaraabo.

يَا أَبَتِ إِنِّي أَخَافُ أَنْ يَمَسَّكَ عَذَابٌ مِنَ الرَّحْمَنِ
فَتَكُونَ لِلشَّيْطَانِ وَلِيًّا ﴿٤٥﴾

46. wuxuu yidhi (aabihiis) ma waxaad
nici adigu ilaahyadayda Ibraahimow
hadaadan joojin waan ku dhagaxyeyn
ee iga tag waligeed.

قَالَ أَرَأَيْتَ أَنْتَ عَنْ ءَالِهَتِي يَا إِبْرَاهِيمَ لَمَلِكٍ
لَّمْ تَكُنْ لَهُ رَحْمَةً لَّا تُرْحَمُكَ وَهَاجِرًا مِّمَّا ﴿٤٦﴾

47. wuxuu yidhi (nabi) Ibraahim nabadgalyo korkaaga ha ahaato waan kuu dambi dhaaf warsan adiga Eebahay, Eebe waa ii naxariiste.

قَالَ سَلِّمْ عَلَيَّ كَمَا سَلِّمْ عَلَىٰ رَبِّكَ رَبِّي إِنَّهُ كَانَ
 فِي حَفِيًّا ﴿٤٧﴾

48. waana idinka fogaan idinka iyo waxad caabudaysaan oo Eebe ka soo hadhay, waxaana baryi Eebahay, waaxaana mudan inaan ku noqonin baryada Eebahay mid ku xumaada (khasaara).

وَأَعْرَبْ لَكُمْ وَمَا تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَأَدْعُوا رَبِّي
 عَسَىٰ آلَا أَكُونَ بِدَعَائِهِ رَبِّي شَفِيًّا ﴿٤٨﴾

qisada nabi Ibraahim iyo aabbihiis iyo qoomkiisii wax badan yuu quraanku ka warramay, halkanna waxaa ka muuqda siduu nabi Ibraahim ugu dadaalay wax u sheegga aabbihiis iyo wuxuu ugu jawaabay, waxaana muuqda baarrinimadiisii oo ruux walba laga rabo inuu u wanaag falo waalidkiis diintaba ha kala duwanaadeene. markuu ka noogay lana hadiday yuu u dambi dhaaf warsaday oo saameeyey waana intaan laga reebin wali, waana taas lagu kala tagay diinta darteed. Illeen diintu ma laha gorgortan iyo Qaraabanimo, haddii xaqa la diidee. Maryam (41-48).

49. markuu ka fogaaday iyaga iyo waxay caabudi oo Eebe ka soo hadhay waxaan siinay Isxaaq iyo Yacquub mid kastana waxaan ka yeellay nabi.

فَلَمَّا أَعْرَبْ لَهُمْ وَمَا يَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَهَبْنَا لَهُ
 إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ كُلًّا جَعَلْنَا نَبِيًّا ﴿٤٩﴾

50. waxaana ka siinnay naxariistanada (wanaag) waxaana u yeellay amaan run ah oo sarraysa

وَوَهَبْنَا لَهُمْ مِنْ رَحْمَتِنَا وَجَعَلْنَا لَهُمْ لِسَانَ
 صِدْقٍ عَلِيمًا ﴿٥٠﴾

51. Ku sheeg kitaabka (nabi) Muuse (wuxuu ahaa ku la saafi yeelay) wuxuu ahaa rasuul nabi ah.

وَأَذْكُرِي فِي الْكِتَابِ مَوْسَىٰ إِنَّهُ كَانَ مُخْلَصًا وَكَانَ رَسُولًا
 نَبِيًّا ﴿٥١﴾

52. waana uga dhawaaqnay dhinaca (buurta) dhuur ee midigta ah, waana soo dhawaynay annagoo la hadli.

وَنَدْبَيْنَهُ مِنْ جَانِبِ الطُّورِ الْأَيْمَنِ وَقَرَّبْنَاهُ نَجِيًّا ﴿٥٢﴾

53. waxaana ka siinnay naxariistanada walaalkiis Haaruun oo nabi ah.

وَوَهَبْنَا لَهُ مِنْ رَحْمَتِنَا أَخَاهُ هَارُونَ نَبِيًّا ﴿٥٣﴾

54. kuna sheeg kitaabka (nabi) Ismaaciil, wuxuu ahaa rumeeyaha yabooha wuxuuna ahaa rasuul nabi ah.

وَأَذْكُرِي فِي الْكِتَابِ إِبْرَاهِيمَ إِنَّهُ كَانَ صَادِقَ الْوَعْدِ
 وَكَانَ رَسُولًا نَبِيًّا ﴿٥٤﴾

55. wuxuuna ahaa mid fara ehelkiisa salaadda iyo zakada, wuxuuna ahaa mid Eebe agtiisa lagaga raalli yahay.

وَكَانَ يَأْمُرُ أَهْلَهُ بِالصَّلَاةِ وَالزَّكَاةِ وَكَانَ عِنْدَ رَبِّهِ
 مَرْضِيًّا ﴿٥٥﴾

56. kuna sheeg kitaabka (nabi) Idriis, wuxuu ahaa runbadane nabi ah.

وَأَذْكُرُ فِي الْكِتَابِ إِدْرِيسَ إِذْ رَسَّاهُ اللَّهُ كَانُ صَدِيقًا نَبِيًّا ﴿٥٦﴾

57. waxaana u koryeellay meel sare.

وَرَفَعْنَاهُ مَكَانًا عَلِيًّا ﴿٥٧﴾

58. kuwaas waa kuwuu u nicmeeyey Eebe oo nabiyadii ah, oo durriyadii aadam ah, iyo kuwaan xambaarray la jirka (nabi) nuux iyo durriyadii nabi Ibraahim iyo israa'iil iyo kuwaan hanuuninay oon doorannay, marka lagu akhriyo korkooda aayaadka Eebaha Raxmaan ah way dhacaan iyagoo sujuudi oo ooyi.

أُولَئِكَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مِنَ النَّبِيِّينَ مِنْ ذُرِّيَةِ آدَمَ وَمِمَّنْ حَمَلْنَا مَعَ نُوحٍ وَمِنْ ذُرِّيَةِ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْرَائِيلَ وَمِمَّنْ هَدَيْنَا وَاجْتَبَيْنَا إِذِ اتَّخَذُوا عَلَيْهِمْ أَيَاتِنَا الزُّمُرُ حُرُوسًا وَنُوحًا وَإِبْرَاهِيمَ ﴿٥٨﴾

markuu nabi Ibraahim isaga tagay aabbihiis iyo qoomkiisii yaa Eebe siiyey Isxaaq iyo wiilkiisii yacquub, Eebana ka yeelay nabiyo, Eebana u naxariistay magac fiicana u yeelay, sidoo kale qisada nabi muuse iyo walaalkiis Haaruun iyana waxbadan yey ku soo aroortay quraanka. sidoo kale nabi Ismaaciilkii fari jiray salaadda iyo zakada, iyo nabi idiriiskii runta badnaa.

waana nabiyaada Eebe u nicmeeyey marka aayaadka Eebe lagu akhriyana sujuuda oo ooya. Maryam (49-58).

59. waxaase ka gadaal maray kuwo xun oo dayacay salaadda oo raacay waxay naftoodu doonto (oo xun) waxayna la kulmi sharr.

*فَخَلَفَ مِنْ بَدْرِهِمْ خَلْفٌ أَضَاعُوا الصَّلَاةَ وَاتَّبَعُوا الشَّهْوَةَ فَسُوفَ يَلْقَوْنَ عَذَابًا ﴿٥٩﴾

60. cidda tobad keenta oo rumeysa oo camal fiican fasha mooyee, kuwaasu waxay gali jannada lagamana dulmiyo waxba.

إِلَّا مَنْ تَابَ وَآمَنَ وَعَمِلَ صَالِحًا فَأُولَئِكَ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ وَلَا يُظْلَمُونَ شَيْئًا ﴿٦٠﴾

61. Jannooyinka cadnin (yey gali) ee ah tuu u yaboohay (Eebaha) Raxmaana addoomadiisa, iyagoo maqan, wuuna ahaan yaboohiisu kii yimaadda.

جَنَّاتٍ عَدْنٍ الَّتِي وَعَدَ الرَّحْمَنُ عِبَادَهُ بِالْعَقْبِ إِنَّهُ كَانَ وَعْدُهُ مَأْتِيًّا ﴿٦١﴾

62. kuma maqlaan dhexdeeda hadal macno darro, ee waxay maqlaan salaam, waxayna ku mudan rizqigooda dhexdooda aroor iyo galabba.

لَا يَسْمَعُونَ فِيهَا لَغْوًا وَلَا سُلُوفًا لَّهُمْ فِيهَا مِنْ رِزْقِهِمْ فِيهَا مِنْ بَخْرٍ وَعِشْيًا ﴿٦٢﴾

63. taasi waa jannada aannu dhaxalsiin addoomadanada kooda ah mid dhawrsada.

تِلْكَ الْجَنَّةُ الَّتِي نُورِثُ مِنْ عِبَادِنَا مَنْ كَانَ تَقِيًّا ﴿٦٣﴾

64. kuma soo dagno amarka Eebaha

وَمَا تَنْزِيلُ الْإِنشَاءِ بِأَمْرِ رَبِّكَ لَهُ مَا بَيْنَ أَيْدِينَا وَمَا خَلْفَنَا

mooyee, waxaa u sugnaaday waxa teenna ah, iyo waxa inaga dambeeya iyo waxa u dhexeeya arrintaas, mana aha Eebahaa mid halmaansan.

وَمَا يَنْبَغُ لَكَ وَمَا كَانَ رُبُّكَ نَسِيًّا ﴿١٤﴾

65. waa Eebaha samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya ee caabud kuna samir cibaadadiisa, ma u ogtahay Eebe wax la mid ah, (oo la magaca).

رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا فَاعْبُدْهُ
وَأَطِيعْ أَمْرَ رَبِّكَ إِنَّكَ عِنْدَ رَبِّكَ لَسَوِيًّا ﴿١٥﴾

Waxaase ka gadaal maray kuwo xun oo salaadda dayacay, xumaanta raacay, oo la kulmi doona ciqaab daran, ciddiise toobad keenta oo camal fiican fasha waxay gali janno lamana dulmiyo, waxayna mudan jannadii Eebe u yaboohay, oy wanaagoo dhan ka heli, xumaanoo dhanna ka dheeraan.

rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yihi: addoonka iyo gaalnimada waxaa u dhexeeya salaadda (muslim).

malaa'igta Eebana waxay uun ugu soo dagi jirtay amarka eebe iyo idankiisa, Eebana waa Eebaha xaqa ah ee samooyinka iyo dhulka. wax la mid ahna ama la magac ahna ma jiro. Maryam (59-65).

66. wuxuu dhihi dadkii (gaalka) ma markaan dhinto yaa laysoo bixin anoo nool.

وَيَقُولُ الْإِنْسَانُ إِذْ أَمَامُكَ لَسَوْفَ أَخْرُجُ حَيًّا ﴿١٦﴾

67. miyuuna xusuusanayn dadku anagu inaanu abuuray horay isagoon waxba ahayn.

أَوْلَا يَذْكُرُ الْإِنْسَانُ أَنَّا خَلَقْتَهُ مِنْ قَبْلُ وَلَمْ يَكُنْ
شَيْئًا ﴿١٧﴾

68. Eebahaan ku dhaartaye waannu kulmin iyaga iyo shayaadiinta, waxaana keenaynaa gaararka jahannamo iyagoo fadhiya.

فَوَرَبِّكَ لَنَحْشُرَنَّهُمْ وَالشَّيَاطِينَ ثُمَّ
لَنَحْضِرَنَّهُمْ حَوْلَ جَهَنَّمَ جِثِيًّا ﴿١٨﴾

69. markaas waxaannu ka siiban koox kasta midkooda ugu daran madax adayg (gaalnimada).

ثُمَّ لَنَنْزِعَنَّ مِنْ كُلِّ شِيعَةٍ أَيُّهُمْ أَشَدُّ عَلَى
الرَّحْمَنِ عَيْنًا ﴿١٩﴾

70. annagaa og kuwa mudnaan badan galidda naarta.

ثُمَّ لَنَعْلَمَنَّ بِالَّذِينَ هُمْ أَوْلَىٰ بِهَا صِلِيًّا ﴿٢٠﴾

71. cid idinka mid ah oon ku aroorayn ma jiro naarta, arrintaasna waxay ku ahaatay Eebahaa wax go'an oo xukuman.

وَإِنْ مِنْكُمْ إِلَّا وَارِدُهَا كَانَ عَلَىٰ رَبِّكَ حَتْمًا
مَّقْضِيًّا ﴿٢١﴾

72. markaas waxaannu korin kuwa Dhawrsaday, waxaannu kaga tagi Daalimiinta Dhexdeeda iyagoo Jilbo u Fadhiya.

ثُمَّ نَسْجِي الَّذِينَ اتَّقَوْا وَنَذَرُ الظَّالِمِينَ فِيهَا
جِثِيًّا ﴿٢٢﴾

73. marka lagu akhriyo korkooda aayaadkanaga oo cad cad waxay u dhihi kuwii gaalobay kuwa rimeeyey la bada kooxood midkee khayrroon nagaadi oo wanaagsan kulan (fadhi).

وَأَذَانُ عَلَىٰ عِظْمِهِمْ إِذِنَّا يَتَّبِعُ قَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا
لِلَّذِينَ آمَنُوا أَيُّ الْفَرِيقَيْنِ خَيْرٌ مَّمَّا وَآخَسُنُ
نَدِيًّا ﴿٧٣﴾

74. badanaa intaan halaagnay hortood quruun ka fiican xoolo (iyo dhar) iyo aragba.

وَكُرْهُ أَهْلُكُمْ أَفَبِهِمْ مِنْ قَرْنٍ هُمْ أَحْسَنُ أَتَنَّا
وَرِيًّا ﴿٧٤﴾

soo bixinta iyo qiyaamadoo la diido waa caadada gaalada, Eebese waa kan abuurray iyagoon waxba ahayn, soona kulmin gaalada iyo shayaadiinta galina naarta jahannamo, Eebaana og cidda mudan arrintaas, waana lawada mari jidka naarta ee Eebaana ka korin kuwa dhawrsaday, kuna daadin daalimiinta oo dullaysan, waana kuwa marka xaqa iyo quraanka lagu akhriyo ugu jawaaba faan iyo wanaag sheegasho. imisuuse Eebe halaagay kuwa xoolo iyo arag wacan. ibnu mascuud wuxuu yidhi: waa lagu wada aroori naarta markaasaa cid walbana waxaa lagu soo bixin camalkiisa. taasina waxay muujin inaan xaalku fududayn, waajibna tahay in la darbado. Maryam (66-74).

75. waxaad dhahdaa ciddii baadi ku sugan ha u fidiyo (sugo) Eebaha Raxmaan ah fidin, markay arkaan waxaa loogu gooddiyey ama cadaaba ama saacadda (qiyaame) waxay ogaan cid-day xumaan badantahay gurigiisu oo tabaryar junuud (ciidamo).

قُلْ مَنْ كَانَ فِي الضَّلَالَةِ فَلْيَمْدُدْ لَهُ الرَّحْمَنُ مَدًّا
حَتَّىٰ إِذَا رَأَوْا مَا يُوعَدُونَ إِمَّا الْعَذَابَ وَإِمَّا السَّاعَةَ
فَسَيَعْلَمُونَ مَنْ هُوَ سَرٌّ مَكَانًا وَأَضْعَفُ جُنْدًا ﴿٧٥﴾

76. wuu u siyaadiyaa Eebe kuwa hanuunay hanuun, kuwa hadha ee suuban (camalka) yaa khayrroon Eebahaa agtiisa abaal marin khayrna roon meel laysu celiyo.

وَيَزِيدُ اللَّهُ الَّذِينَ أَحْسَنُوا مَدَدًا وَيُهْدِي وَأَهْدِي وَاللَّيْقِيَاتِ
الصَّالِحَاتِ خَيْرٌ عِنْدَ رَبِّكَ ثَوَابًا وَخَيْرٌ مَرَدًّا ﴿٧٦﴾

77. ka warran midka ka gaalobay aayaadkanaga oo yidhi waxaa lay siin (aakhiro) xoolo iyo carruur.

أَفَرَأَيْتَ الَّذِي كَفَرَ بِآيَاتِنَا وَقَالَ لَأُوتِيَنَّ
مَالًا وَوَلَدًا ﴿٧٧﴾

78. ma wuxuu daalacday waxa maqan, mise wuxuu ka yeeshay Eebaha Raxmaana agtiisa ballan.

أَتَطَّلَعُ الْعَيْبَ أَمْ أَخَذَ عِنْدَ الرَّحْمَنِ عَهْدًا ﴿٧٨﴾

79. saas ma aha ee waannu qori wuxuu sheegi, waxaana u fidinnaa (kordhin) cadaabka fidin.

كَلَّا سَتَكُنُّبُ مَا يُقُولُ وَنَعْمُ لَهُ مِنَ الْعَذَابِ
مَدًّا ﴿٧٩﴾

80. waana dhaxlaynaa wuxuu sheegi wuxuuna noo imaan kali.

وَرِزْقُهُ مَا يُقُولُ وَيَأْتِيَنَا قَرَادًا ﴿٨٠﴾

ciddii baadida iyo xumaanta ku madax adaygta Eebana waa u sii badiyaa, markaasay ogaan qiyaamada cadaab iyo cidda tabaryar, oo xun. kuwa hanuunayse wuxuu u siyaadiyaa Eebe hanuun, camalka fiican yaana hadhi oo wax tari kuna khayrroon Eebe agtiisa. kuwa gaaloobayse ee sheegan in la siin caruur iyo xoolo ma waxay daalacdeen waxa maqan, mise Eebey ballan la dhigteen, saas ma aha ee waa la qori waxay sheegi, cadaabna waa loo badin, wuxuuna imaan qiyaamada kali. Maryam (75-80).

81. waxay yeesheen Eebe ka sokow ilaahyo inay ugu noqdaan cizi (tabar).

وَأَتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ آلِهَةً لِيَكُونُوا لَهُمْ
عِدًّا ۝٨١

82. saas ma aha ee waxay ka gaaloobi cibaadadooda, waxayna ku noqon korkooda lid (col).

كَلَّا سَيَكْفُرُونَ بِعِبَادِهِمْ وَيَكُونُونَ عَلَيْهِمْ
ضِدًّا ۝٨٢

83. miyaadan ogayn inaan ku dirro shayaadiinta gaalada oy boorrin (baadiyeyn) baadi.

أَلَمْ تَرَ أَنَّا أَرْسَلْنَا الشَّيْطِينَ عَلَى الْكَافِرِينَ
تَوْرِهِمْ أَزْأًا ۝٨٣

84. ee ha ku digdegin korkooda, waanu uun u tirin tiree.

فَلَا تَعْجَلْ عَلَيْهِمْ إِنَّمَا نَعْدُهُمْ عَذَابًا ۝٨٤

85. xusuuso maalintaan u kulmineyno kuwa dhawrsaday Eebaha Raxmaana iyagoo wafdi ah.

يَوْمَ نَخْتُمُ الْمُنْتَقِينَ إِلَى الرَّحْمَنِ وَقَدْ آتَا
۝٨٥

86. oon u kaxaynayno dambiiilayaasha xagga jahannamo iyagoo aroora.

وَنَسُوفُ الْمَجْرِمِينَ إِلَى جَهَنَّمَ وَرِثًا ۝٨٦

87. mana hantaan shafeeco cid ka yeelata Eebaha Raxmaana agtiisa ballan mooyee.

لَا يَمْلِكُونَ الشَّفْعَةَ إِلَّا مَنِ اتَّخَذَ عِنْدَ الرَّحْمَنِ
عَهْدًا ۝٨٧

88. waxay dheheen (gaaladu) wuxuu yeeshay Eebaha Raxmaana ilmo.

وَقَالُوا اتَّخَذَ الرَّحْمَنُ وَلَدًا ۝٨٨

89. waxaad la timaadeen wax wayn.

لَقَدْ جِئْتُمْ شَيْئًا إِذَا ۝٨٩

90. oy u dhawdahay samooyinku inay la dillacaan lana jeexmo dhulku oy la hoobato buuruhu burbur.

تَكَادُ السَّمَوَاتُ يَتَطَّرْنَ مِنْهُ وَتَنْشَقُّ
الْأَرْضُ وَنَخِرُّ لِيُبَالِ هَذَا ۝٩٠

91. inay u sheegeen Eebaha Raxmaana ilmo.

أَنْ دَعَا لِلرَّحْمَنِ وَلَدًا ۝٩١

92. kuma habboona Eebah Raxmaana inuu yeesho ilmo.

وَمَا يَنْبَغِي لِلرَّحْمَنِ أَنْ يَتَّخِذَ وَلَدًا ۝٩٢

Wuxuu ka warrami Eebe inay gaaladu yeesheen ilaahyo Eebe ka soo hadhay inay cisse iyo gargaar ka helaan, saasna ma aha ee way diidi doonaan qiyaamada colla way u noqon. shaydaan iyo gaalla waa saaxiib ku kicin xumaanta, ee samir wax walba wuxuu leeyahay waqtiye. tan kale maalinta qiyaame wuxuu Eebe soo kulmin kuwa dhawrsada iyagoo wafdi sharaf leh ah,

dambilayaashana waxaa loo kaxayn xagga jahannamo iyagoo aroori, wax Eebe ka soo hadhay oo shafeeco hantana ma jiro cid ballan ku yeelatay Eebe agtiisa mooyee, eebana ilmo ma yeelan, warkaasina waa arrin wayn oy u dhawdahay in cirku iyo dhulku la dillaco, buuruhuna la burburi gaadhaan, illeen eebey ilmo sheegeene, taasina kama suurowdo eebe. Cali Binuu Abii Dhaalib wuxuu yidhi: kuwa dhawrsada waxaa la soo kulmin iyagoo gaadiid fiican saaran, intay ka garaacaan Albaabka Jannada. Maryam (81-92).

93. wax kastoo Samada iyo Dhulka ku sugan wuxuu u imaan Eebe isagoo Addona.

إِنَّ كُلَّ مَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ إِلَّا إِيَّانِي
الرَّحْمَنِ عَبْدًا ﴿١٣﴾

94. wuu koobay Eebe wuuna Tiriyeey Tiro.

لَقَدْ أَحْضَنَهُ وَعَدَّهُ عَدًّا ﴿١٤﴾

95. dhammaantoodna waxay u imaan Eebe Qiyaamada iyagoo Kali ah.

وَكُلُّهُمْ آتِيهِ يَوْمَ الْفِتْمَةِ قَرْدًا ﴿١٥﴾

96. kuwa Xaqa rumeeyey ee Camal fiican falay wuxuu u yeeli Eebaha Raxmaana Jacayl.

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ
سَيَجْعَلُ لَهُمُ الرَّحْمَنُ وُدًّا ﴿١٦﴾

97. waxaan uun ugu fududaynay Quraanka Carrabkaaga inaad ugu Bishaarayso Quraanka kuwa dhawrsada uguna Digtid Qoom dood badan (oo xun).

فَأَنصَبْنَا سِرِّنَهُ بِلِسَانِكَ لِتَبْشِرَ بِهِ
الْمُتَّقِينَ وَتُنذِرَ بِهِ قَوْمًا لَدُنَّا ﴿١٧﴾

98. badanaa intaan halaagnay hortood Qarni, ma ka kasaysaa xaggooda (aragtaa) Ruuxna, ama ma ka maqli xaggooda Cod.

وَكُرِّهْنَا لَهُمْ ذِكْرَهُمْ فَزَلُّوا مِنْهُم مِّنْ
أَحَدٍ أَوْ تَسْمَعُ لَهُمْ رِكْزًا ﴿١٨﴾

Cirka iyo Dhulka iyo waxa u dhexeeyaba waxa ku sugan Eebaa iska leh, oyna Cid walbaa u imaan Qiyaamada iyadoo kaligeeda. Eebana waa koobay Khaliqiga waana u tirsanyahay, Ciddii Xaqa rumeysa Wanaagna sameysa wuxuu Eebe u yeeli Jacayl. Siduu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yelee) sheegay: In markuu Eebe Jeclaado ruux uu faro Jabriil inuu Jeclaado markaasuu Jabriil u dhawaaqaa Ehelka Samada inay jeclaadaan, markaasaa Dhulkana aqbal loogu yeelaa, Cadhaduna waa sidaas. Quraankana Eebaa u Sahlay Carrabka si loogu Bishaareeyo kuwa dhawrsada, uguna Digo Gaalo madax agag oo Muran badan. waxbadan baana la Halaagay Quruumo ka horeeyey wax raadana aan laga arkayn wax shanqadhana aan laga maqlayn.

Cismaan binu Cafaan wuxuu yidhi: (Eebe ha ka raalli noqdee) ruux kastoo khayr fala ama shar fala wuxuu Eebe Huwiyaan Marada Camalkiisa. Maryam (93-98).

Suurat Dhaahaa

سُورَةُ طه

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Dhaahaa (Nabiyow) micna kalana waa lasheegaa.

طه ١

2. maanaan dejin korkaga Quraanka inaad ku Dhibbooto.

مَا أَنْزَلْنَا عَلَيْكَ الْقُرْآنَ لِتَشْقَى ٢

3. waase waanada Ciddii cabsan.

إِلَّا أَنْصَرَهُ لِمَنْ يَخْشَى ٣

4. waana soo dejinta Eebaha Abuuray Dhulka iyo Samooyinka sare.

تَنْزِيلًا لِمَنْ خَلَقَ الْأَرْضَ وَالسَّمَوَاتِ الْعُلَى ٤

5. Eebaha Raxmaana Carshiguu ka kor noqday (si u cunanta).

الرَّحْمَنُ عَلَى الْعَرْشِ اسْتَوَى ٥

6. waxaana u sugnaaday waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan iyo waxa u dhaxeeya iyo waxa ka hooseeya Dhulka.

لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا وَمَا تَحْتَ الثَّرَى ٦

7. haddaad kor u Qaaddo Hadalka Eebe waa ogyahay waxa qarsoon iyo waxa la qariyey.

وَإِنْ يَجْمَعِرْ بِأَقْوَالِ فَإِنَّهُ يَعْلَمُ السِّرَّ وَأَخْفَى ٧

8. Eebe Ilaah xaq lugu caabudo majiro isaga mooyee, waxaana u sugnaaday Magacyo Fiican.

اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ لَهُ الْأَسْمَاءُ الْحُسْنَى ٨

9. ma ku soo Gaadhay warkii (Nabi) Muuse.

وَهَلْ أَتَاكَ حَدِيثُ مُوسَى ٩

10. markuu arkay Dab oo u yidhi Ehelkiisa Nagaada (suga) Anigu waxaan Arkaa Dabe, waxaana u dhawahay inaan idiinka keeno Dhuxul ama aan ka helo Dabka korkiisa Cid wax tusisa.

إِذْ رَأَى نَارًا فَقَالَ لِأَهْلِهِ امْكُثُوا إِنِّي آنَسْتُ نَارًا عَلَىٰ آتِيكُمْ مِنْهَا بَقِيسٌ أَوْ أَحَدٌ عَلَى النَّارِ هُدًى ١٠

Quraanka Eebe uguma soo degin Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu ku dhibtamo siday Gaaladii sheegeen ee Quraanku waa Digniin iyo soo dejin Eebeha Sare ee Awoodda leh, wax walbana hanta, wax walbana og kor iyo Hoosba, Ilaah xaq lugu caabudo majiro isaga mooyee, Magacyo Fiican baana u sugnaaday. Qisadii Nabi Muuse iyo Iftiinkuu Arkay iyo siduu Xaalkiisu ahaana wax badan yuu quraanku ka warramay, si Nabiga loo xoojiyo'loona Samirsiyo. Quraankuna waa khayr iyo Wanaag iyo Naxariis'waxaana ku dadaala Cid Khayr leh. waxaana sugnaatay: Ruuxuu Eebe Khayr la doono wuxuu kasisiiyaa Diinta. Waxaa wariyey (Bukhaari iyo Muslim). Dhaahaa (1-10).

11. markuu yimid (Muuse) Dabkii waxa loogu Dhawaaqay Muusow.

فَلَمَّا أَتَاهَا نُورِي بِمُوسَى ١١

12. anigu waxan ahay Eebahaa ee Siib Kabahaaga Adigu waxaad ku sugantahay Toggii Daahirnaa ee Dhuwa.

إِنِّي أَنَا رَبُّكَ فَاخْلَعْ نَعْلَيْكَ إِنَّكَ بِأَلْوَادِ
الْمَقْدِسِ طُلُوِي ١٢

13. anaana ku doortay ee maqal waxa lagu waxyoon.

وَأَنَا أَخْتَرْتُكَ فَاسْتَمِعْ لِمَا يُوحَى ١٣

14. Anigu waxaan ahay Alle Ilaah xaq lugu caabudo majiro Animooyee ina caabud, Oogna Salaadda Xuskayga.

إِنِّي أَنَا اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا أَنَا فَاعْبُدْنِي وَأَقِمِ الصَّلَاةَ
لِيَذْكُرِي ١٤

15. Saacadda (Qiyaame) way imaan waxana u Dhawahay inaan Qariyo in laga Abaal mariyo Naf kasta waxay Camal Fashay.

إِنَّ السَّاعَةَ آتِيَةٌ أَكَادُ أُخْفِيهَا لِتُجْزَىٰ كُلُّ
نَفْسٍ بِمَا تَسْعَى ١٥

16. ee Yuusan kaa Iilin Xaggeeda Ruuxaan Rumeyn Saacadda, raacayna Hawadiisa (Xun) ood Halaagsanto.

فَلَا يَصِدُّكَ عَنْهَا مَنْ لَّيَّاؤُمُنُ بِهَا وَاتَّبَعَ هَوَاهُ
فَتَرَدَىٰ ١٦

17. waa maxay Taas Midigtaada ku Jirta Muusow (ogaal waydiin).

وَمَا تَلَكَ بِمِيمِينِكَ بِمُوسَى ١٧

18. wuxuu yidhi iyadu waa Ushaydii waa Cuskadaa Korkeeda waxna waan ugu Lulaa Adhigayga Dana kalana waa iigu sugnaadeen.

قَالَ هِيَ عَصَايَ أَنُوكَّ وَأُوعِيَهَا وَأَهْمُهَا
عَلَىٰ عَيْنِي وَلِي فِيهَا مَعَارِبُ أُخْرَىٰ ١٨

19. wuxuu yidhi (Eebe) Tuur Usha Muusow.

قَالَ أَلْفِيهَا بِمُوسَى ١٩

20. wuuna Tuuray waxayna soo baxday Mas Ordi.

فَأَلْفَيْهَا فَإِذَا هِيَ حَيَّةٌ تَسْعَى ٢٠

21. wuxuuna yidhi (Eebe) Qaad hana Cabsanin waxaannu ku celin Xaalkeedii Horee.

قَالَ خُذْهَا وَلَا تَخَفْ سَنُعِيدُهَا سِيرَتَهَا
الْأُولَىٰ ٢١

Markuu Nabi Muuse soo gaadhay Nuurkii yaa la faray inuu siibo kabaha Illeen Toggii Daahirka ahaa yuu ku suganyahaye ee Dhuwa. Eebana wuu doortay Nabi Muuse waxaana loo waxyooday inaan Ilaahay mooyee Eebe kale jirin iyo Salaadda dar Eebe u oogo. Saacadduna way iman Shakilaaan' Naf walbana waa la abaal marin ee yaan Jidka Toosan kaa leexinin Cidaan Rumeynin oo Raacay Xumaan oo Halaagsamay. Markaasaa Eebe ka warramay Ushii Nabi Muuse iyo Xaalkeedii sida Meela badan lagu Sheegay, Taasina waxay ku tusin Awoodda Eebe. Dhaahaa (11-21).

22. U Dum Gacantaada Garabkaaga waxay soo Bixi iyadoo Cad Xumaan la'aan, waana Calaamad kale.

وَأَصْمَمُ بِدَاخِلِ جَنَاحِكَ تَخْرُجُ بَيْضَاءَ مِنْ عَيْنَيْهِ
سُوءَ آيَةٍ أُخْرَى ﴿٢٢﴾

23. Inaan ku tusinno Aayaadkanaga weyn.

لِرَبِّكَ مِنْ آيَاتِنَا الْكُبْرَى ﴿٢٣﴾

24. ee Aad xagga Fircoon wuu Xad-gudbaye (Kibray).

أَذْهَبَ إِلَى فِرْعَوْنَ إِنَّهُ طَغَى ﴿٢٤﴾

25. wuxuu yidhi (Muuse) Eebow ii waasici Laabta.

قَالَ رَبِّ اشْرَحْ لِي صَدْرِي ﴿٢٥﴾

26. iina Sahal (fududee) Amarkayga.

وَيَسِّرْ لِي أَمْرِي ﴿٢٦﴾

27. Furna Guntinta Carrabkayga.

وَأَحْلَلْ عَقْدَةً مِنْ لِسَانِي ﴿٢٧﴾

28. ha Kaseen Hadalkeygee.

يَقْفَهُمْ أَتَوَلَّى ﴿٢٨﴾

29. Iina yeel Wasiir Ehelkeyga ah.

وَأَجْعَلْ لِي زَوْجًا مِّنْ أَهْلِ بَيْتِي ﴿٢٩﴾

30. Haaruun Walaalkay.

هَرُونَ أَخِي ﴿٣٠﴾

31. Kuna adkee «Xooji» Tabartayda (Dhabarkayga).

أَشَدُّ بِهِ أَرَى ﴿٣١﴾

32. Lana wadaaji Amarkayga.

وَأَشْرِكُهُ فِي أَمْرِي ﴿٣٢﴾

33. Inaan kugu Tasbiixsanno wax badan.

كَيْ تَسْبِيحَكَ كَبِيرًا ﴿٣٣﴾

34. oon ku Xusno wax badan.

وَتَذَكَّرَكَ كَبِيرًا ﴿٣٤﴾

35. Adugu waxaad tahay mid na Arkee.

إِنَّا كُنَّا بِنَا بَصِيرًا ﴿٣٥﴾

36. Wuxuu yidhi (Eebe) waa lagu siiyey Warsigaagii Muusow.

قَالَ قَدْ أُوتِيتَ سُؤْلَكَ يَا مُوسَى ﴿٣٦﴾

37. waana kugu Mannaysannay Wanaag (ku siinay) korkaaga markale.

وَلَقَدْ مَنَّا عَلَىكَ مَرَّةً أُخْرَى ﴿٣٧﴾

38. marka u waxyoonaay Hooyadaa (ku ilhaamay) wixii lagu ilhaameeyey.

إِذْ أَوْحَيْنَا إِلَىٰ أُمِّكَ مَا يُوحَىٰ ﴿٣٨﴾

39. ku Tuur Muuse Taabuud, kuna tuur

أَنْ تَقْدِفِي فِي التَّابُوتِ فَاقْدِفِي فِي السَّيْرِ فَلْيَقِهِ أَلِيمٌ

Taabuudka Hirka Badda, Hirkuna ha ku rido Xeebta, waxaa qaadan Colkayga iyo Colkiisa (Fircoon), waxaana kugu tuuray Jeceylkeyga korkaaga iyo in lagu barbaariyo Ilaalintayda.

يَا سَاحِلَ بَاحِدَةٍ عُدُوِّي وَعَدُوِّيَّةَ وَالْقَيْتُ عَلَيْكَ
مَحَبَّةً مِنِّي وَلِئُصَمِّعَ عَلَيَّ عِيَّتِي ﴿٣٩﴾

Aayadahani waxay ka warrami sida Eebe u Xoojiyey Nabi Muuse una Siyey Gacan Nuura Cudu la'aan, una faray inuu aado Fircoon una digo, una waasiciyey Laabtiisa, Amarkiisana u fududeyey, Carrabkiisana u wanaajiyey si ay u kasaan Hadalkiisa, walaalkiis Haaruunna Nabi Wasiiir ah ka dheeyay, inay Eebe u wada Caabudaan, iyo in Eebe ka qabalay Nabi Muuse Baryada Eebe, una wanaag falay Yaraantiisii markuu ka nabadgaliyey Colkiisii Fircoon, Hooyadiina ku celiyey. Taasina waxay ku tusin sida Eebe u Ajiibay Baryada Mu'miniinta, iyo in xaqu Guusha yeelan iyo in wanaagga laysla doono. Dhaahaa (22-39).

40. (waxaan kugu Mannaysanay) markay Socotay Walaashaa oy lahayd maydin tusiyaa Ruux idiin Dhaqaalayn waxana Kugu celinay Hooyadaa si ay u qabowdo isheedu, oyna Murugoon, waxaadna Dishay Naf waana kaa korinay walbahaar, waana ku Imtixaanay Imtixaan, waxaadna ku nagaatay Sanooyin Ehelkii Madyan, markaasaad ku timid Qaddar (Eebe) Muusow.

إِذْ فَتِنَّا أُمَّتَكَ فَمَقُولُ هَلْ أَدُلُّكُمْ عَلَىٰ مَن يَكْفُرُهُ
فَرَجَعْنَاكَ إِلَىٰ أُمَمِكَ لَتَفَتَّرَنَّ بِهَا وَلَا تَحْزَنْ
وَقَتَلْتَ نَفْسًا فَنَجَّيْنَاكَ مِنَ الْغَمِّ وَفَتَنَّاكَ فُتُونًا
فَلَيْتَ سِينِينَ فِي أَهْلِ مَدْيَنَ فُجِحَّتْ عَلَىٰ قَدَرٍ
يَكْمُوسِي ﴿٤٠﴾

41. waxaana kuu doortay Naftayda.

وَأَصْطَفَعْتُكَ لِنَفْسِي ﴿٤١﴾

42. ee La taga Adiga iyo Walaalkaa Ayaadkayga hana ka daalina Xuskayga.

أَذْهَبَ أَنْتَ وَأَخْوَاكَ بِعَائِيَّتِي وَلَا تَبْتَئَانِي ذِكْرِي ﴿٤٢﴾

43. Aada Xagga Fircoon wuu Xadgudbaye.

أَذْهَبَا إِلَىٰ فِرْعَوْنَ إِنَّهُ طَغَىٰ ﴿٤٣﴾

44. una dhaha Hadal Jilicsan bal inuu waxa xusuusto ama Cabsado.

فَقُولَا لَهُ قَوْلًا لَّيْسَ أَهْلُهُ بِتَدْرِكُوكَ وَأَوْخَسِنِي ﴿٤٤﴾

45. waxay dheheen Eebow waxaannu ka Cabsan inuu nagu degdego ama nagu xadgudbo.

فَلَا رَبَّنَا إِنَّا أَتَيْنَاكَ أَنفَادًا وَأَنْ
يَطْعَنِي ﴿٤٥﴾

46. wuxuu yidhi (Eebe) ha Cabsanina anaa idinla jira waana Maqli oon Arkaa.

قَالَ لَا تَخَافَا إِنِّي مَعَكُمْ أَسْمَعُ وَأَرَىٰ ﴿٤٦﴾

47. ee u Taga (Fircoon) una dhaha annagu waxaan nahay Rasuulladii Ee-

فَأَيُّهَا فَاقُولَا إِنَّا رَسُولَا رَبِّكَ فَأَرْسِلْ مَعَنَا

bahaa ee Dir (u daa) Banii Israa'iil hanala jireene, hana Cadaabin (Ciqaa-bin) waxaan kuula nimid Aayad xagga Eebahaa, nabadgalyana ha ahaato Ruuxii raaca Hanuunka.

بَنِي إِسْرَائِيلَ وَلَا تُعَذِّبْهُمْ قَدْ جِئْنَاكَ بِآيَاتٍ مِنْ رَبِّكَ
وَأَسْأَلُكَ عَلَىٰ مَنْ أَنْتَ الْهَادِي ﴿٤٧﴾

Aayadahanna waxay daba joogaan kuwii hore, waxayna ka warrami sida Ebe u Nabadgaliyey Nabi Muuse una doortay, uguna diray Fircoon, una faray inay Hadal Jilicsan kula hadlaan, Cabsi iyo Xumaanna ayna ka yaabin, oy warsadaan inuu ka tago Banii Israa'iil ha raaceen Xaqee oosan Adoonsan. Waxayna tusin in Xaqa Dadka si cad iyo fudud loogu yeedho oon Canaan iyo Caytan lahayn, sida Eebe faray Nabi Muuse, Nabiga Muxamed ahna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) uu faray Falayna sida ka muusqata Warqaduhuu u qoray Hiriqlihii Ruum, oo ahaa Islaam aad nabad gashid, Eebana ha ku Siiyo Ajirkaaga labajeece. waana taas aadaabta Islaamku. Dhaahaa (40-47).

48. Annaga waxaa Naloo Waxyooday in Cadaab u Sugnaaday Ruuxii Beeniya (Xaqa) oo Jeedsada.

إِنَّا قَدْ أُوحِيَ إِلَيْنَا أَنَّ الْعَذَابَ عَلَىٰ مَنْ كَذَّبَ
وَتَوَلَّىٰ ﴿٤٨﴾

49. Wuxuu Yidhi (Fircoon) waayo Eebihiin Muusow.

قَالَ مَنْ رَبِّكُمْ يَا مُوسَىٰ ﴿٤٩﴾

50. Wuxuu yidhi (Muuse) Eebahanno waa kan Siiya wax kasta Abuurkiisa oo Toosiyey.

قَالَ رَبُّنَا الَّذِي أَعْطَىٰ كُلَّ شَيْءٍ حَلْقَهُ، رَبُّهُدَىٰ ﴿٥٠﴾

51. Wuxuu yidhi (Fircoon) Sidee Yahay Xaalkii Quruumihii hore.

قَالَ فَتَابِلِ الْقُرُونِ الْأُولَىٰ ﴿٥١﴾

52. Wuxuu Yidhi (Muuse) Cilmigoodu waa Eebe Agtiis Kitaab aan ka dhumeyn Eebe uuna Halmaameyn.

قَالَ عَلَّمَهَا عِنْدَ رَبِّي فِي كِتَابٍ لَا يَضِلُّ رَبِّي
وَلَا يَنسَىٰ ﴿٥٢﴾

53. Waa Eebaha ka Yeelay Dhulka Gogol, oo idinka bixiyey Dhexdeeda Waddooyin oo idiinka soo Dejiyey Samada Biyo oon ku soo Bixinay Noocyo Doog ag oo kala Tagsan.

الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ مَهْدًا وَسَوَّكَ لَكُمْ فِيهَا
سُبُلًا وَأَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجْنَا بِهِ أَزْوَاجًا
مِنْ نَبَاتٍ شَتَّىٰ ﴿٥٣﴾

54. ee Cuna oo Daajiya Xoolihiinna, Arrintaasna Calaamooyin yaa ugu Sugan kuwa Caqliga leh.

كُلُوا وَارْزُقُوا أَنْعَمَ كَرِيمًا فِي ذَلِكَ لَا تَلْبَسُوا لُؤْلُؤًا
النَّهَىٰ ﴿٥٤﴾

55. Xaggeedaan (Dhulka) idinka Abuuray, Dhexdeedana idinku Celin, Xaggeedaana Laydinka soo Bixin Mar Kale.

* مِنْهَا خَلَقْنَاكُمْ وَفِيهَا نُعِيدُكُمْ وَمِنْهَا نُخْرِجُكُمْ
تَارَةً أُخْرَىٰ ﴿٥٥﴾

56. Waxaan Dhab ahaan u Tusinay (Fircoon) Aayaadkanaga Dhamaan, wuuna Beeniyey oo Diiday.

وَلَقَدْ آرَبْنَاهُ آيَاتِنَا كُلَّهَا فَكَذَّبَ وَإِنِّي

Markuu Nabi Muuse Xaqa u Caddeeyey Fircoon uguna yeedhay ugana Digay Cigaab yuu isla weynaaday warsadayna Eebeha Muuse Isagoo Ismoogaysiin Caqli Xumo Darteed, Wuxuuse u Caddeeyey Nabi Muuse in Eebe yahay kan Tusiya wax kastoos Abuuray Maslaxadiisa mid Dayaca ama Halmaamana ahayn, waana kan Dhulka Gogol ka yeelay, Waddooyinna ka bixiyey, Cirkana Biyo ka keenay, kuna soo bixiya Cunno kala duwan, oo Calaamad u ah kuwa Caqliga leh, Waana Eebaha Dadka Dhulka ka Abuuray, kuna Celin, kana soo bixin Qiyaamada. Daalimse had iyo jeer Xaquu diidaa Sidiif Fircoonkii si walba wax loo Tusiyeey ee beeniyey Xaqa diidayna. Ciddii Caqli lehse waa inay Fikirtaa kana leexataa Waddadii Fircoon iyo Waxa la mid ah. Dhaahaa (48-56).

57. Wuxuu yidhi (Fircoon) Ma waxaad noola timid Inaad nagaga Bixiso Dhulkanaga Sixirkaaga Muusow.

قَالَ لَيْسَتِنَا تُخْرِجَتَا مِنْ أَرْضِنَا بِسِحْرِكَ
يَمُوسَىٰ

58. Waxaannu kuula imaanaynaa Sirxir la mid ah ee nooyeel Dhexdeenna Ballan aynaan Baajinayn anaga iyo Adigu, Meel eg (La yaqaan).

فَلَمَّا آتَيْنَكَ بِسِحْرِ قَهْلِهِمْ فَاجْعَلْ بَيْنَنَا وَبَيْنَكَ
مَوْعِدًا لَا نُخْلَفُهُ نَحْنُ وَلَا أَنْتَ مَكَانًا سُوًى

59. Wuxuu yedhi (Nabi Muuse) Ballandeennu waa Maalinta Quruxda (Kulan-kooda) waana in la soo kulmiyo Dadka Barqin.

قَالَ مَوْعِدُكُمْ يَوْمَ الزَّيْتَةِ وَإِنِّي مُخَشِّرُ النَّاسَ
صُبْحَىٰ

60. Wuuna jeedsaday Fircoon wuxuuna kulmiyey Dhagartiisii wuuna yimid.

فَتَوَلَّىٰ فِرْعَوْنُ فَجَمَعَ كَيْدَهُ ثُمَّ أَتَىٰ

61. Wuxuu ku yidhi Muuse Magaciin be ha ku Abuuranina Eebaha korkiisa Been oos idinku Halaago Gadaab, waxaana Khasaaray Ruuxii Been Abuurta.

قَالَ لَهُمُ مُوسَىٰ وَإِنَّكُمْ أَتَّفَعُوا عَلَىٰ اللَّهِ كِبَارًا
فَإِنَّ سَجْةَ كُمْ بَعْدَ آبٍ وَقَدْ خَابَ مِن آفَتِي

62. Waxayna ku Doodeen amardooda dhexdooda wayna faqeen.

فَتَنَزَّلْنَا عَلَيْهِمُ الْغَمَامَ وَأَنزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مِثْرًا
مِنْ مَاءٍ غَمَامًا غَمَامًا وَجَاءُوا بِقُلُوبِهِمْ كَبْدًا

63. Waxayna dheheen Labadani waa Saaxirro waxayna dooni inay Idinkaga Bixiyaan Dhulkiinna Sixirkooda oy la tagaan Dariiqadiinna (Sharaftiinna) Fiican.

قَالُوا إِن هَٰذَا إِلَّا سِحْرَانِ يُرِيدَانِ أَنْ يُخْرِجَاكُم
مِّنْ أَرْضِكُمْ بِسِحْرِهِمَا وَيَذْهَبَا بِطَرَفَيْكُمُ
الْمَشْأَلَىٰ

64. ee Kulmiya Dhagar (tiinna) Imaadana idinkoo Saf ah waxaa Liibaanay Maanta Ciddii Sarreysee.

فَأَجْمِعُوا كَيْدَكُمْ ثُمَّ آتُوا صَفًا وَقَدْ أَفْلَحَ الْيَوْمَ
مَنْ أَسْتَعْلَىٰ

Wali waxaa Socda Qisadii Nabi Muuse iyo Daalimkii Fircoon ahaa, Meelo badan yeyna Quraanka kaga Soo Aroortay, Inkastoo Mid walba Micna Gaara Tusin, Halkanna wuxuu Sheegay in Nabi Muuse Dooni inuu kaga Bixiyo Dhulka Sixi, wuxuuna kulmiyey Sixiroolayaalkii Waqinta waa la mudaystay, Hase yeeshee Nabi Muuse wuu Waaniyey Dadkaas wuxuuna uga digay Xumaanta. Tasina waxay ku Tusin in Had iyo Jeer Xaqa la Faro, inkastoo Firconn Kiciyey Dadkii Guubaabiyeyna, isagoo ku Beer Jileecsan, Nabi Muuse inuu Rabo Sharaftooda iyo Dawladnimadooda Qaato, Dhulka Masarra dooni inuu isagu u hadho, taasina waa afka xumaanlow, ee waxaa dhab ah inuu Nabi Muuse iyo Mu'miniintuba ay rabaan wanaag, nabadgalyo iyo in xaqu sarreeyo, xumaantuna dhamaato. Dhaahaa (57-64).

65. waxay dheheen Muusow ama tuur Usha ama aan anagu ahaanno kuwa hor tuura.

قَالُوا لَيْسَ مُوسَىٰ إِلَّا فِتْنَةٌ وَمَا أَنَّا بِبُكُورٍ أُولَٰئِكَ
مِنَ اللَّغْوِ ﴿١٥﴾

66. wusuu yidhi (Muuse) bal Tuura waxaana soo baxay xadhka hoodii iyo Ulahoodii oo loogu ekeysiyyey sixirkoodii inay ordi.

قَالَ بَلْ أَلْقُوا فَإِذَا حِجَابٌ مَّحْمُورٌ وَعَصِيْبُهُمْ مُّخْتَلٍ عَلَيْهِ
مِنَ سِحْرِهِمْ أَنَّهُمْ لَسَعَىٰ ﴿١٦﴾

67. wuxuuna ka kasay naftiisa cabsi Muuse.

قَالُوا حَسَّ فِي نَفْسِهِ خِيفَةٌ مُّوسَىٰ ﴿١٧﴾

68. waxaana nidhi ha cabsan adigu adaa Sarreyne.

فَلَمَّا لَمْ يَنْصَبْ إِلَيْكَ آتَىٰكَ الْوَعْلَىٰ ﴿١٨﴾

69. Tuur waxa midgtaada ku jira ha gurato waxay sameeyeene, waxay uun sameeyeen Dhagar sixir, Mana Liibaa-no Sixirrow meeshuu yimaaddo.

وَأَلْقَى مَا فِي بَيْتِكَ تَلْقَفًا مَا صَعُورًا إِنَّمَا صَعُورًا
كَيْدٌ سِحْرٍ وَلَا يُفْلِحُ السَّاحِرُ حَيْثُ أَتَىٰ ﴿١٩﴾

70. waxaa la riday Saaxiriintii iyagoo Sujuudi, waxayna dheheen waxaan rumeynay Edbaha Haaruun iyo Muuse.

قَالُوا السَّحْرَةُ مُّبْدَأٌ قَالُوا أَمْ آتَىٰ رَبِّي هَٰؤُلَاءِ
وَمُوسَىٰ ﴿٢٠﴾

71. wuxuuna yidhi (Fircoon) miyaad u rumeyseen ka hor idankayga isagu waa kan idinku wayn ee idin baray Sixirka waxaan goyn Gacmihiinna iyo Lugihiinna si isdhaaf ah waxaana idinku (daldali) wadhi Jirrid Timir, waxaadna ogaanaysaan midkanaga daran cadaab hadhidna badan.

قَالَ أَمْ أَنْتُمْ لَهُ قَبِيلٌ أَن أَدْنَىٰ لَكُمْ إِلَٰهَةٌ لَّكِبْرٌ كِبْرَ الَّذِي
عَلَّمَكُمُ السِّحْرَ فَلَا قَطْعَانَ أَيْدِيكُمْ وَأَرْجُلَكُمْ فَمَنْ
خَلْفَ وَلَا صَبِيحَتَكُمْ فِي جُدُوعِ النَّخْلِ وَتَتَعَلَّمَنَّ
أَيُّنَا أَشَدُّ عَدَابًا وَآبِقَىٰ ﴿٢١﴾

72. waxay dhaheen ka dooran meyno waxa noo yimid oo xujo ah iyo Eebaha na abuuray, ee xukmi waxaan xukumi, waxaan uun xukumi nolosha aduuno.

قَالُوا لَنْ نُؤْيِرَكَ عَلَىٰ مَا جَاءَنَا مِنَ الْبَيِّنَاتِ وَالَّذِي
قَطَرْنَا فَأَقْصَ مَا آتَىٰ قَائِلٌ إِنَّمَا تَقْضِي هَٰذِهِ الْحَيَاةَ
الدُّنْيَا ﴿٢٢﴾

73. annagu waxaan rumeynay Eeba-

إِنَّمَا آتَىٰ رَبَّنَا بِتِلْكَ الْغَيْفِ لَنَا حَظَلَيْنَا وَمَا أَكْرَهْتَ نَاعِيَهُ

hanno inuu noo dhaafo gafafkanaga iyo waxaad nagu qasabtay (fircoon) oo Sixira Eebaa Khayroon oo hadhi.

مِنَ السِّحْرِ وَاللَّهُ خَبِيرٌ وَبَلِغٌ ﴿٧٦﴾

Dadkii Fircoon ku soo kulmiyey inay kala hortagaan Nabi Muuse Sixir waxay Arrintii noqotay in laga adkaaday waxay dhoob dhoobeen waxna tarin, markaas rumeeyeen xaqii Fircoonna Ciqaabay, umase aabayaelin mar hadday arkeen xaqii, wana kaas Xaq iyo xumaan, cidhibta fiican iyo sharaftiina xaqaa yeeshay, dulli iyo Fircoon iyo qoomkissi yey ku hadhay. Dhaahaa (65-73).

74. ruuxii u yimaadda Eebihiis (aakharo) isagoo dambiile ah waxaa u sugnaaday jahannamo kumana dhinto dhexdeeda kumana noolaado.

إِنَّهُمْ مَن يَأْتِي رَبَّهُم مَّجْرُومًا فَإِن لَّهُ جَهَنَّمُ لَا يَمُوتُ فِيهَا وَلَا يَحْيَىٰ ﴿٧٤﴾

75. ruuxiise u yimaadda isagoo Mu'min ah oo falay camal fiican Kuwaas waxaa u sugnaaday jannooyinka sare.

وَمَن يَأْتِيهِ مَوْمِنًا فَعَدَّ عَمَلُ الصَّالِحِينَ فَأُولَٰئِكَ لَهُمُ الدَّرَجَاتُ الْعُلَىٰ ﴿٧٥﴾

76. Jannooyinka nagaadiga (yey gali) ooy socoto dhexdeeda Wabiyaal iyagoo kuwaari dhexdeeda, taasina waa abaalmarinta Ciddii nadiif noqota.

جَنَّاتٍ عَدْنٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا وَذَٰلِكَ جَزَاءُ مَن تَزَكَّىٰ ﴿٧٦﴾

77. waxaan dhab ugu waxyoonay (Nabi) Muuse guuri Addoomahayga uguna yeel waddo Badda oo ingagan hana ka cabsan haleel, hana cabsan (Badda).

وَلَقَدْ أَوْحَيْنَا إِلَىٰ مُوسَىٰ أَن أَسْرِ بِعِبَادِي فَاصْرِهِمْ لَهَا طَرِيقًا فِي الْبَحْرِ يَنَسًا لَا تَخَفْ دَرَكًا وَلَا تَفْشَىٰ ﴿٧٧﴾

78. waxaana raacay Fircoon (oo wata) Colkiisii waxaana ka daboolay hirka Xaggiisa wax daboolay.

فَاتَّبَعَهُمْ فِرْعَوْنُ فَغَشِيَهُمْ مِّنَ الْبَاسِ مَا غَشِيَهُمْ ﴿٧٨﴾

79. wuxuuna dhumiyey Fircoon Qoomkiisii mana hanuunin.

وَأَصْلَ فِرْعَوْنَ قَوْمَهُ وَمَاهِدَىٰ ﴿٧٩﴾

80. Bani Israa'iilow waxaan idinka korinay cadawgiinna, waxaana idinkula yaboohtanay (ballan) dhinicii buurta ee midig, waxaana ku soo dejinay kor kiinna Macaan iyo shimbir.

يَبْنَئِي إِسْرَائِيلَ قَدْ أَنجَيْنَاكَ مِّنْ عَذُوبِكُمْ وَعَاذَنَّاكَ مِن جَانِبِ الطُّورِ الْأَيْمَنِ وَنَزَّلْنَا عَلَيْكَ الْمَنَّىٰ وَالسَّلْوَىٰ ﴿٨٠﴾

81. ka cuna wanaaggaan idinku Arzuqay hana ku xadgudbina dhexdiisa, oo idinku dhaco cadhadaydu, ruuxay ku dhacdo cadhadaydu dhabbuu u Hoobtay (halaagmay).

كُلُوا مِن طَيِّبَاتِ مَا رَزَقْنَاكُمْ وَلَا تَطْغَوْا فِيهِ فَيَحِلَّ عَلَيْكُمْ غَضَبِي وَمَن يَحِلَّ عَلَيْهِ غَضَبِي فَقَدْ هَوَىٰ ﴿٨١﴾

82. anigu waan u dhaafid badanahay ruuxii Toobad keena oo rumeeya oo fala wanaaga oo hanuuna.

وَأَيُّ لَعْنًا لَمَن تَابَ وَآمَنَ وَعَمِلَ صَالِحًا ثُمَّ أَسْتَدَىٰ ﴿٨٢﴾

Ma sinna cid dambiile ah oo gali naar uusan kana dhimanayn kuna noolaanayn iyo ruux xaqa rumeeyey oo camal fiican falay oo janno ku waari, waxaana sugnaaday in ehelu jannaha sare loo arki sida xidigga markii nabiga (naxariis iyo nabadgalyo eebe korkiisa ha yeelee) la warsaday inay nabiyada yihiin wuxuu yidhi: Eebaan ku dhaartaye waa kuwa rumeeyey Eebe rumeeyna Rasuullada. Aayadaha kale waxay sheegi in Eebe faray Nabi Muuse inuu garaaco Badda isagoon cabsanayn, fircoonna la Halaagay intuu dhumiyeey qoomkiisii iyo inuu Eebe nicmeeye Binii Isarr'iil, kana koriyey colkoodii wanaagna ku arzuqay uuna yahay Dambi dhaafe ciddii toobad keenta oo rumeysa. Dhaahaa (74-82).

83. maxaa kaa soo dedjiyey Qoomkaagii Muusow.

﴿وَمَا أَعْجَلَكَ عَنْ قَوْمِكَ يَمُوسَىٰ﴾ ﴿٨٣﴾

84. wuxuu yidhi (Muuse) iyagu waa kuwan raadkaygay ku soo joogaan, waana kuu soo dag degay Eebow inaad iga raalli noqoto.

قَالَ هُمْ أَوْلَاءُ عَلَىٰ أَثَرِي وَعَجِلْتُ إِلَيْكَ رَبِّ لِتَرْضَىٰ ﴿٨٤﴾

85. wuxuu yidhi (Eebe) Annagu waxaan imtixaannay qoomkaagii gadaashaa waxaana dhumiyeey Saamiri.

قَالَ فَإِنَّا قَدْ فَتَنَّا قَوْمَكَ مِنْ بَعْدِكَ وَأَضَلَّهُمُ السَّامِرِيُّ ﴿٨٥﴾

86. markaasuu u noqday (Nabi Muuse) qoomkiisii isagoo cadhaysan oo walba-haarsan wuxuuna yidhi qoomkayow miyuuna idiin yaboohin Eebihiin yabooh wanaagsan, ma waxaa idinku dheeraaday korkiinna ballankii mise waxaad doonteen inay idinku dhacdo Cadhada Eebe ood u baajiseen ballankaygii.

فَرَجَعَ مُوسَىٰ إِلَىٰ قَوْمِهِ غَضْبَانَ أَسِفًا قَالَ يَقُولُونَ لَا تُبْدِكُوا لَنَا رُبُّكُمْ وَعَدْنَا غَسَّاتًا أَفْطَالَ عَلَيْنَا كَيْدُ الْغَيْثِ أَمْ أَرْدْتُمَنَا أَن يَحِيلَ عَلَيْكُمْ عَصِيبٌ مِّن رَّبِّكُمْ فَأَخْلَفْتُم مَّوعِدِي ﴿٨٦﴾

87. waxay dheheen maanaan u baajin ballankaaga awooddanada waxaase nala saaray culaysyo Alaab oo ah waxa qoomku isku qurxinjireen waana tuurray siduu u tuurray Saamiri.

قَالُوا مَا أَخْلَفْنَا مَوْعِدَكَ بِمَلِكِنَا وَلَكِنَّا حُمِلْنَا أَوْزَارًا مِّن رَّبِّنَا أَلْقَوْمٍ فَفَدَقْنَاهَا فكَذَلِكَ أَلْقَى السَّامِرِيُّ ﴿٨٧﴾

88. wuxuuna u soo bixiyey dibi muuqal ah oo cod leh, waxayna dhaheen kani waa Ilaahiin iyo Ilaahii Muuse wuuna halmaamay.

فَأَخْرَجَ لَهُمْ عِجْلًا جَسَدًا لَهُ خُورٌ فَقَالُوا هَذَا إِلَهُكُمْ وَإِلَهُ مُوسَىٰ قَيْسِي ﴿٨٨﴾

89. miyeyna arkayn inuusan u soo

أَفَلَا يَرَوْنَ أَنَّهُمْ يُدْعُونَ إِلَهًا إِلَّا هُوَ فَلَا يَمْلِكُ

Celinayn Hadal una hananayn dhib iyo Nacfi (midna).

لَهُمْ ضُرٌّ وَلَا نَقْعًا ﴿٨٩﴾

Markii Fircoon iyo qoomkiisii la halaagay yaa nabi Muuse Wafdi la baxay si ay u aadaan Buurtii lagula hadlay Nabi Musse, wuuna ka hormaray, hase yeeshee Eebaa u sheegay in qoomkiisii labaadyeeyey intuu ka soo maqnaa, markaas Nabi Muuse noqday isagoo cadhaysan, oo walbahaarsan, markuu arrinta warsadayna ay sheegeen in Nin Saamiri la dhihi jiray dhumiyey una sameeyey suuro Dibi inay caabudaan isagoo sheegay inuu Ilaah yahay, waase wax la yaab leh in dibi la caabudo iyo wax la mid ah, taasiina waxay ku tusin in ciddii dhunta ay wareeri oy marba wax caabudi. Eebaase xaq sugan ah. Dhaahaa (83-89).

90. wuxuuna u yidhi Haaruun mar hore qoomkayow waa uun laydinku fidmeeyey, Eebihinna waa Raxmaan ee i raaca, adeecana amarkayga.

وَلَقَدْ قَالَ لَهُمْ هَارُونُ مِنْ قَبْلُ يَا قَوْمِ إِنَّمَا فُتِنْتُمْ بِهِ وَإِنَّ رَبَّكُمُ الرَّحْمَنُ فَاتَّبِعُونِي وَأَطِيعُوا أَمْرِي ﴿٩٠﴾

91. waxay dhaheen kama tagayno korkiisa inaan ku nagaanno intuu nooga soo noqon muuse.

قَالُوا لَنْ نَبْرَحَ عَلَيْهِ عَنكِيفَ حَتَّىٰ يَرْجِعَ إِلَيْنَا مُوسَىٰ ﴿٩١﴾

92. wuxuu yidhi (muuse) Haaruunow maxaa kuu diiday markaad aragtay inay dhumeen.

قَالَ يَهُدُونَ مَا مَنَعَكَ إِذْ رَأَيْتَهُمْ ضَلُّوا ﴿٩٢﴾

93. inaad isoo raacdo ma waxaad caasiday Amarkeygii.

أَلَا تَتَّبِعُنَّ أَفْصَحْتُمْ أَمْرِي ﴿٩٣﴾

94. wuxuu yidhi (Haaruun) ina hooyow hayqabanin Gadhka iyo madaxa, anigu waxaan ka cabsaday inaad dhahdo waxaad kala gaysay Baniisraa'iil dhexdooda oodan maqlin hadalkayga.

قَالَ يَبْنَؤُمْ لَا تَأْخُذْ بِلِحْيَتِي وَلَا بِرَأْسِي ۖ إِنِّي خَشِيتُ أَنْ تَقُولَ فَرَّقْتَ بَيْنَ بَنِي إِسْرَائِيلَ وَلَمْ تَرْقُبْ قَوْلِي ﴿٩٤﴾

95. wuxuu yidhi (muuse) xaalkaagu muxuu yahay saamiriyow.

قَالَ فَمَا خَطْبُكَ يَا سَمِيرِيُّ ﴿٩٥﴾

96. wuxuuna yidhi waxaan arkay waxayna arkin, waxaana qaatay wax ka mid ah raad rasuul (malaga) waana tuuray saasayna ii qurxisay naftaydu.

قَالَ بَصُرْتُ بِمَا لَمْ يَبْصُرُوا بِهِ فَقَبَضْتُ قَبْضَةً مِنْ أَشْرِ الرَّسُولِ فَسَبَّحْتُهَا وَكَذَلِكَ سَوَّلَتْ لِي نَفْسِي ﴿٩٦﴾

97. wuxuu yidhi (Muuse) tag, waxaa kuu sugnaaday nolosha inaad dhahdo taabasho ma jirto, waxaana kuu sugnaaday waqti aadan baajinayn, day ilaahaagii aad ahayd mid ku kor nagi (caabdudi) waanu gubi markaas waxaa-

قَالَ فَأَذْهَبَ فَإِنَّ لَكَ فِي الْحَيَاةِ أَنْ تَقُولَ لَا مِسَاسَ وَإِنَّ لَكَ مَوْعِدًا لَنْ نُخْلِفَهُ ۖ وَلَأُنْظَرَ إِلَيْكَ الْهَيْكَلُ الَّذِي ظَلْتَ عَلَيْهِ عَاكِفًا لَنْ نَحْرِقَهُ ۖ ثُمَّ لَتَنَسِفَهُ فِي إِلَهٍ نَسْفًا ﴿٩٧﴾

na ku firdhin mowjadda (badda) firdhin.

98. Eebihiin waa uun Ilaahiinna ah kaan xaq lugu caabudin isaga mooyee, wuuna u waasac noqday wax kasta ogaansho.

إِنَّمَا إِلَهُكُمُ اللَّهُ الَّذِي لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ وَسِعَ
كُلَّ شَيْءٍ عِلْمًا ﴿٩٨﴾

Wuu ka reebay Haaruun Bani israa'iil cibaadada dibiga wuxuuna ugu yeedhay inay Eebe uun caabudaan, isagana maqlaan, wayse diideen, markuu soo noqday Nabi muuse wuu canaantay Haaruun wuxuuna doonay inuu wax yeelleeyo, hase yeeshee Haaruunbaa u caddeeyey sababta kana codsaday inuusan dhibaato u gaysan. Nabi muusana wuxuu wax warsaday Saamiri wuxuuna u sheegay inay naftiisu u qurxisay arrintaas, wuxuuse Muuse ku yidhi; Tag adoooy ciqaabu kuu sugnaatay oo ah inaad dhahdaa istaabasho ma jirto iyo tii aakhiro, halkiibuuna ku gubay sawirkii dibiga baddana raaciyey illeen Eebe waa Ilaah wax walba og. Dhaahaa (90-98).

99. saasaan kuugu qisoon (sheegi) warkii hor maray, waxaana kaa siinay agtanada quraan.

كَذَلِكَ نَقُصُّ عَلَيْكَ مِنْ أَنْبَاءِ مَا قَدْ سَبَقَ وَقَدْ آتَيْنَاكَ
مِنْ لَدُنَّا ذِكْرًا ﴿٩٩﴾

100. ciddii ka jeedsata xaggiisa waxay xambaari maalinta qiyaame culays (dambi).

مَنْ أَعْرَضَ عَنْهُ فَإِنَّهُ يَحْمِلُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وِزْرًا ﴿١٠٠﴾

101. iyagoo ku waari (ciqaabta) dhexdeeda waxaana u xumaaday iyaga maalinta qiyaame rar.

حَالِدِينَ فِيهِ وَسَاءَ لَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ حِمْلًا ﴿١٠١﴾

102. waa maalinta la afuufi suurka, oon soona kulmineyno dambiilayaasha maalintaas iyagoo indho cawlan.

يَوْمَ يُنْفَخُ فِي الصُّورِ وَنَحْشُرُ الْمُجْرِمِينَ يَوْمَئِذٍ
رُزْقًا ﴿١٠٢﴾

103. wayna is warsan (xansan) dhexdooda maydaan ku nagaanin (adduunyada) Toban mooyee (maalmood).

يَتَخَفَتُونَ بَيْنَهُمْ إِنْ لَبِثْتُمْ إِلَّا عَشْرًا ﴿١٠٣﴾

104. anagaa og waxay dhihi, markuu dhihi kooda ugu jid leh maydaan nagaanin maalin mooyee.

تَحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَقُولُونَ إِذْ يَقُولُ أَمْشَلُهُمْ طَرِيقَةً
إِنْ لَبِثْتُمْ إِلَّا يَوْمًا ﴿١٠٤﴾

105. waxay ku warsan Buuraha waxaad dhahdaa waxaa burburin Eebahay burburin.

وَيَسْتَأْذِنُكَ عَنِ الْجِبَالِ فَقُلْ يَنْسِفُهَا رَبِّي نَسْفًا ﴿١٠٥﴾

106. wuxuuna ka yeeli meel siman oo ebar ah.

فَيَذَرُهَا قَاعًا صَفْصَفًا ﴿١٠٦﴾

107. ku arki maysid qallooc iyo taag midna.

لَا تَرَىٰ فِيهَا عِوَجًا وَلَا أَمْتًا ﴿١٠٧﴾

108. maalintaas waxay raaci dhawaaqa-ha, kamana leexdaan waxayna u xasis-hay Cododku Eebaha Raxmaana mana maqashid shanqadh mooyee.

يَوْمَ يَدْعُوتُ السَّمْعُوتُ الدَّاعِيَ لِأَعْوَجَ لَهُ، وَخَشَعَتِ الْأَصْوَاتُ لِلرَّحْمَنِ فَلَا تَسْمَعُ إِلَّا هَمْسًا ﴿١٠٨﴾

109. maalintaas ma anfacdo shafeeco cid Eebaha Raxmaana idmo oo ka raalli noqday hadalkiisa mooyee.

يَوْمَ يَدْعُوتُ السَّمْعُوتُ الْإِلَهَ الْأَمِّنَ ذِينَ لَهُ الرَّحْمَنُ وَرَضِيَ لَهُ قَوْلًا ﴿١٠٩﴾

110. Wuxuu ogyahay Eebe waxa hortaa-da ah iyo waxa ka dambeeya mana ku koobayaan Eebe ogaansho.

يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلَا يُحِيطُونَ بِهِ عِلْمًا ﴿١١٠﴾

111. waxay u khuduucday Wajiyadu Eebaha nool ee wax maamula, waxaana khasaaray ruuxii xambaara dulmi.

* وَوَعَدَ الْأَوْرَثُونَ لِلْحَيِّ الْقَيُّومِ وَقَدْ خَابَ مَنْ حَمَلَ ظُلْمًا ﴿١١١﴾

112. ruuxii fala wanaag isagoo ru-meeyey kama Cabsado dulmi iyo nus-qaamin midna.

وَمَنْ يَعْمَلْ مِنَ الصَّالِحَاتِ وَهُوَ مُؤْمِرٌ فَلَا يَخَافُ ظُلْمًا وَلَا هَضْمًا ﴿١١٢﴾

Siduu Eebe uga warramay Nabiga warkii Nabi Muuse iyo Fircoon iyo wixii dhexmaray yuu Eebe ugu qisoon Nabiga warkii kuwii hore, ciddii xaqa ka jeedsatana wuxuu xambaari qiyaamada dambi wuxuuna imaan isagoo dullaysan oon wax garanayn, waana maalinta buuruhu burburi oy dambu khushuuci. cid hadli iyo cid shafeecina ma jirto idanka Eebe la'aantii illeen Eebaa wax walba koobay wajiyaaduna u hogaansami, waxaana khasaari dulmiile mu'minkuse kama Cabaado Dulmi. Saas darteed wa in wanaagga lagu dadaalo xumaantana laga fogaado. Dhaahaa (99-112).

113. saasaanu kugu soo dejinnay Qu-raan Carabi ah uguna caddaynay (cel-celinay) dhexdiisa Gooddi inay dhawrsadaan darteed ama u timaado xusuus (waano).

وَكَذَلِكَ أَنْزَلْنَاهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا وَصَرَّفْنَا فِيهِ مِنَ الْوَعِيدِ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ أَوْ يُحْذِرُوا لَهُمْ ذِكْرًا ﴿١١٣﴾

114. waxaa sarreeya Eebaha xaakimka xaqa ah, hana ku degdegin quraanka ka hor dhamayn waxyigiisa xaggaaga, waxaadna dhahdaa Eebow ii kordhi Cilmi.

فَتَعَلَىٰ اللَّهُ الْمَلِكُ الْمُقْتَبُ وَلَا تَجِدُ بِالْقُرْآنِ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَفْضَىٰ إِلَيْكَ وَحْيُهُ، وَقُل رَّبِّ زِدْنِي عِلْمًا ﴿١١٤﴾

115. dhab ahaan yaan ula Ballantannay Aadan mar hore wuuna halmaamay kama aanaan helin niyo Adag.

وَلَقَدْ عَاهَدْنَا آلَ آدَمَ مِنْ قَبْلِ فَنَسَىٰ وَتَرْتَجِدُ لَهُمْ عَذَابًا ﴿١١٥﴾

116. xusuuso markaan ku nidhi Ma-

وَأَذَقْنَا لِلْمَلَكَةِ أَصْحَابُهَا أَذْيًا ﴿١١٦﴾

laa'igta u Sujuuda Adam. Wayna Sujuudeen Iblis mooyee oo diiday.

فَسَجَدُوا لِأَلَيْسَ أُنَى ١١٧

117. waxaana nidhi Adamow kani (Iblis) waa Colkaaga iyo colka Haweeneydaada ee yuusan idinka bixinin janada ood dhibbooto.

فَقُلْنَا يَا آدَمُ إِنَّ هَذَا عَدُوٌّ لَكَ وَارْتَدَّ فَكَلَّا
يُخْرِجُكَ كَمَا مِنَ الْجَنَّةِ فَتَشْقَى ١١٧

118. waxaa kuu sugnaaday inaad ku gaajoon dhexdeeda kuna arradin.

إِنَّكَ الْأَجْمَعُ فِيهَا وَلَا تَعْرَى ١١٨

119. waxaana kuugu sugnaaday inaad ku oomin dhexdeeda kuna Qorroxoobin.

وَأَنَّكَ لَا تَظْمَرُ فِيهَا وَلَا تَصْحَى ١١٩

120. waxaase waswaasiyey shaydaan wuxuuna yidhi Adamow ma ku tusiyaa Geedda waaridda iyo xukun aan gaboobayn.

فَوَسَّوَسَ إِلَيْهِ الشَّيْطَانُ قَالَ يَا آدَمُ هَلْ أَدُلُّكَ
عَلَى شَجَرَةٍ الْخَالِدِ وَمُلْكٍ لَا يَبْئَلُ ١٢٠

121. wayna cuneen xaggeeda waxaana u muuqday Cawradoodii, waxayna noqdeen kuwa isku dhejiya korkooda caleenta jannada, wuu caasiyey Aadan Eebihiis wuuna leexday.

فَأَكَلَا مِنْهَا فَبَدَتَ لهُمَا سَوْءُهُمَا وَطَفِقَا
بِخُصْمَانٍ عَلَيْهِمَا مِنْ وَرَقِ الْجَنَّةِ وَخَصَى آدَمُ
رَبَّهُ فَقَوَى ١٢١

122. waxaase doortay Eebihiis wuuna ka Toobadaqbalay oo hanuuniyey.

ثُمَّ اجْتَبَاهُ رَبُّهُ وَقَتَابَ عَلَيْهِ وَهَدَى ١٢٢

Quraanka Eebaa ku dejiyey Nabiga, wuxuuna ku celceliyey wax sheeg si loo wacdoomo, wuxuuna Eebe faray Nabiga inuusan ku degdegin akhriska quraanka intaan la dhammayn waxyiigiisa, wuxuuna faray inuu Eebe warsado Cilmi kordhin. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ilaahow igu anfac waxaad i bartay ina bar wax i anfci. Iina kordhi cilmi mahadna Eebaa leh si kasta. (Tirmidi iyo Ibnu Maajah). Qisada Nabi Adamse waxay ku faah faahsantahay Suuradda Al baqarah. waxaase jirta inuu Iblis Col u yahay dadka had iyo jeer, cid kastana isku dayi inuu dhumiyo cid Ebe ka dhowro mooyee. Dhaahaa (113-122).

123. wuxuu yidhi (Eebe) ka hoobta Jannada dhammaantiin qaarkiin qaar colbuu u yahaye, hadduu xaggayga idiinka yimaaddo hanuun ruuxii raaca hanuunkeyga ma dhumo (adduunka) mana xumaado (aakhiro).

قَالَ أَهَيِّطْ لَهَا جَمِيعًا بَعْضُكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ
فَإِنَّمَا يَأْتِيَنَّكُمْ مِنِّي هُدًى فَمَنِ اتَّبَعَ هُدَايَ
فَلَا يَضِلُّ وَلَا يَشْقَى ١٢٣

124. ruuxiisa ka jeedsada xuskeyga (Quraanka) waxaa u sugnaaday nolol

وَمَنْ أَعْرَضَ عَن ذِكْرِي فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً

cidhiidhi ah, waxaana soo kulminaynaa maalinta qiyaame isagoo arag la'.

صَنَكَا وَتَحْسُرُهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ أَعْمَى ﴿١٢٤﴾

125. wuxuuna dhihi Eebow maxaad ii soo kulmisay (keentay) anoo arag la' oona ahaa arke (adduunkii).

قَالَ رَبِّ لِمَ حَسَرْتَنِي أَعْمَى وَقَدْ كُنْتُ بَصِيرًا ﴿١٢٥﴾

126. wuxuu yidhaa (Eebe) waa saas waxaa kuu timid aayadahanaga waadna halmaatay saasaana maanta lagaaga tagi (Sida halmaan).

قَالَ كَذَلِكَ أَتَتْكَ آيَاتُنَا فَنَسِيْتَهَا وَكَذَلِكَ الْيَوْمَ تُنْسَى ﴿١٢٦﴾

127. saasaan ku abaal marinaa ciddii xadgudubta oon rumayn aayaadka Eebihis cadaabka aakhiraana daran oo hadhid badan.

وَكَذَلِكَ نَجْزِي مَنْ أَسْرَفَ وَلَمْ يُؤْمِنْ بِآيَاتِ رَبِّهِ
وَلَعَذَابُ الْآخِرَةِ أَشدُّ وَأَقْبَى ﴿١٢٧﴾

128. miyuuna u caddayn Gaalada intaan halaagnay hortood quruumo iya-goo ku socda guryahooda, taasna calaamaa ugu sugan kuwa caqliga leh.

أَفَلَمْ يَهْدِ لَهُمْ كُرْهُهُمْ فَلْيَعْبُدُوا إِلَهُهُمْ مِنْ أَلْفُورٍ يَتَمُسَّوْنَ
فِي مَسْجِدِهِمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّأُولِي النُّهَى ﴿١٢٨﴾

129. haddayna jirin kalimad u hor martay Eebahaa iyo muddo magacaaban wuxuu ahaan lahaa cadaabku mid ku soo deg dega.

وَلَوْلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتْ مِنْ رَبِّكَ لَكَانَ لِزِمَامِهَا وَجَلٌ
مُّسَمًّى ﴿١٢٩﴾

130. ee ku samir waxay sheegi kuna tasbiixso adoo mahadda Eebahaa ku dheehan ka hor qorrax soo bax iyo ka hor dhicidda, saacadaha habeenkiina tasbiixso (Tuko) iyo darfaha maalinta inaad raalli noqoto.

فَأَضْرَبَ عَلَى مَائِقُولُونَ وَسَبَّحَ بِحَمْدِ رَبِّكَ قَبْلَ طُلُوعِ
النُّجُومِ وَقَبْلَ غُرُوبِهَا وَمِنْ أَنَايَ أَتْلَح مُسْتَبِحٌ
وَإِطْرَافَ النَّهَارِ لَعَلَّكَ تَرْضَى ﴿١٣٠﴾

Waa la soo sheegay qisada Nabi Adam iyo Iblis iyo siduu dadka col ugu yahay, tan kale ciddii raacda quraanka ma dhumo mana khasaaro.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Wuxuu Eebe u damiin qaaday ciddii quraanka akhrida oo ku camal fasha uusan dhumin adduunyada, kuna xumaanin aakhiro Ciddise xaqa ka jeedsata waxay noolaan nolol xun, wuxuuna imaan qiyaamada isagoo indhola' maxaa yeelay adduunkii yuu xaqa ka jeedsaday, saasaana lagu abaal marin ciddii xadgudubta, waana in lagu waano qaato umadihii hore ee la halaagay, Eebana cidduu doono wuu halaagaa hadduusan waqti la sugaynin, waase in la adkeysto lana samro, cibaadadana lagu dadaalo maalin iyo habeenba, illeen wixii nabiga la faray ummaddana waa la faraye si Eebe inoo nabadgaliyo maalinta qiyaame. Dhaahaa (123-130).

131. hawtaagin indhahaaga waxaan ugu raaxaynay nooc ka mid ah oo quruxda nolashaa adduun si aan ugu fidayno,

وَلَا تَمُدَّنَّ عَيْنَيْكَ إِلَى مَن مَّتَعْنَا بِهِ أَزْوَاجًا مِنْهُمْ زَهْرَةَ
الْحَيَاةِ الدُّنْيَا لِنَفْسِنَهُمْ فِيهِ وَرَرُّكَ رَبِّكَ خَيْرٌ وَأَقْبَى ﴿١٣١﴾

rizqiga Eebahaa yaase khayrroon oo hadhid badan.

132. far ehelkaaga salaadda kuna samir korkeeda ku warsanmayno rizqiye anagaa ku arzuqi cidhibta (fiicana) waxaa iska leh dhawrsashada.

وَأْمُرْ أَهْلَكَ بِالصَّلَاةِ وَاصْطَبِرْ عَلَيْهَا لَا تَسْأَلُكَ رِزْقًا
مَنْ نَزَقُوكَ وَالْعَقِبَةُ لِلتَّقْوَى ﴿١٣٢﴾

133. waxay dheheen gaaladii muu noola yimaaddo aayad xagga Eebihis ka timid, miyuuna u imaanin Maraggii wixii ku sugnaa Kutubihii hore.

وَقَالُوا لَوْلَا يَأْتِينَا بِآيَاتٍ مِنْ رَبِّنَا أَوْ لَمْ يَأْتِنَا
بَيِّنَاتٌ مِمَّا فِي الصُّحُفِ الْأُولَى ﴿١٣٣﴾

134. haddaan ku halaagno Cadaab Rasuulka (iyo Quraanka) ka hor waxay dhihilahaayeen Eebahannow maxaad noogu diri wayday rasuul oon raacno aayaadkaaga ka hor dulloowanaga iyo Fadeexadanada.

وَلَوْ أَنَّا أَهْلَكْنَاهُمْ بِعَذَابٍ مِنْ قَبْلِهِمْ لَقَالُوا رَبَّنَا
لَوْلَا أَرْسَلْتَ إِلَيْنَا رَسُولًا رَسُولًا فَنُنَبِّئَكَ مِنْ
قَبْلِ أَنْ نَدْرِكَ وَنَجْزِي ﴿١٣٤﴾

135. waxaad hahdaa (Nabiyow) dhammaan way sugi ee suga, waxaad ogaan doontaan cidda jidka toosan iyo cidda hanuusane.

قُلْ كُلُّ مُرْتَضٍ فَرِيضٍ فَسَعَتِ الْعُلُومُ مَنْ أَصْحَابُ
الصِّرَاطِ السَّوِيِّ وَمَنِ اهْتَدَى ﴿١٣٥﴾

Eebe wuxuu faray Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuusan dayin waxa adduunyo ah ee loogu raaxeeyey kuwaas gaalada ah illeen waa wax yar oo tagi, ee uu salaadda faro kuna samro, Eebaana wax arzuqa, cidhib fiicana waxaa iska leh ciddii dhawrsata.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaan idiinku cabsi badnahay waxa Eebe idin siin oo quruxda adduunka ah waxayna dhaheen waa maxay quruxda adduunka Rasuul allow, wuxuu yidhi waa barakada dhulka. Taasina u jeedadu ma aha inaan la shaqaysan, waa inayan aduunyada kaliya ku shuqlinin. aayadaha dambe waxay ka warrami inay gaaladu xaqa diidi isaggo Nabiga loogu caddeyey kutubihii hore, haddii la halaago iyagoon Rasuul loo soo dirin waxay ku caban lahaayeen maxaa naloo halaagay anagoon rasuul naloo soo dirin. nase la sugo way kala caddaan cidda toosan iyo tan qalooocsan. waxaana sugnaatay in umadda Nabigu ugu badnaan maalinta qiyaame. Waase in wanaagga lagu dadaalo si loo noqdo ummadda Nabiga.

Dhaahaa (131-135).



Suurat Al-Anbiyaa'

سُورَةُ الْأَنْبِيَاءِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa u dhawaaday Dadka Xisaabtoodii iyagoo Halmaansho ku Sugaan oo Jeedsan.

أَقْرَبَ لِلنَّاسِ حِسَابُهُمْ وَهُمْ فِي غَفْلَةٍ مُّعْرِضُونَ ﴿١﴾

2. Quraankastee oo uga Yimaadda Xagga Eebahood kana Soo darriya way maqlaan iyagoo Ciyaari.

مَا يَأْتِيهِمْ مِنْ ذِكْرٍ مِنْ رَبِّهِمْ مُجَدِّدٍ إِلَّا آسَمَعُوهُ وَهُمْ يَلْعَبُونَ ﴿٢﴾

3. Oy shuqloontahay Quluubtoodu, waxayna hoos u dhigeen Faqii kuwii Dulmi Falay (iyahoo dhihi) kanu ma waxaan Dad idinkoo kale ahaynaa, ma waxaad u imanaysaan sixir idinkoo Arka.

لَاهِيَةً قُلُوبُهُمْ وَأَسْرَأَ النَّجْوَى الَّذِينَ ظَلَمُوا هَلْ هَذَا إِلَّا بَشْرٌ مِثْلُكُمْ أَفَتَأْتُونَ السَّحَرَ وَأَنْتُمْ تَبْصُرُونَ ﴿٣﴾

4. Wuxuu yidhi (nabigii) Eebahaybaa Og Hadalka Samada ku Sugaan iyo Dhulka, waana Maqle Oge ah.

قَالَ رَبِّي يَعْلَمُ الْقَوْلَ فِي السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٤﴾

5. Waxay Dheheen (Gaaladii) Saas ma aha ee waa Qarowyo saa ma aha ee wuu Been Abuurtay, Saas ma aha ee waa gabayaa ee ha noo keeno Aayad Sidii Lagu diray Kuwii hore.

بَلْ قَالُوا أَضْعَفَتْ أَعْيُنُنَا أَمْ لَنَا قَلْبٌ غَيْرٌ قَالُوا إِنَّمَا هِيَ إِشْرَاتُ الْوَالِدِينَ الَّذِينَ آمَنُوا مِنْ قَبْلُ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُتَّقُونَ ﴿٥﴾

6. Mayna Rumeynin Hortood Magaalo aan Halaag (La doonay) ee Ma iyagaa Rumeyn.

مَاءَ مَنَّتْ قَبْلَهُمْ مِنْ قَوْمِهِ أَهْلَكْنَاهَا أَهْمَةٌ يُؤْمِنُونَ ﴿٦﴾

Suuraddan Waxaa lagu Magacaabay Suuradda Ambiyada, Maxaayeelay waxaa ku soo Arooray Qisadooda. Aayadahanna waxay ka warrami inay Saacaddii Qiyaame Dhawdahay Dadkoo Halmaansan. Wixii u yimaadda Gaalada oo Xaq hana way iska dhagaysan iyagoo Ciyaari, Faq Xunna Faqi oo isu Sheegi Inayan Maqlin Dad la mid ah, xaqana Ay sixir ku sheegeen, Eebaase og waxa cirka iyo Dhulka ku sugan Maqlina, Quraankuna ma aha wax lagu Qarway ama Heesaa la yimid, Nabiguna wuxuu ula yimid Xaq Cad, Maxayse waano Tari Mar Haddii Xaqa la Diido Lana Caasiyo. Ibnu Cabbaas Wuxuu Yidhi: Maxaad Leedihiin oo u Warsanaysaan Ehelu Kitaabka waxay Haystaan iyagoo Leexiyey oo Badalay o siyaadiyey oo Nusqaamiyey, Kitaabkiinaana u dambeeyey Kitaabaha, Dhaar Eebce waad Akhriyaysaan isagoo Cad oon La dheehin. Al-Anbiyaa' (1-6).

7. Maanaan Dirin Hortaa Rag mooyee, kuwaas oon u Waxyoonyay, ee Warsada kuwa Cilmiga leh Haddaydaan wax Ogayn.

وَمَا أَرْسَلْنَا قَبْلَكَ إِلَّا رِجَالًا نُّوحِي إِلَيْهِمْ
فَسْئَلُوا أَهْلَ الذِّكْرِ إِنْ كُنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿٧﴾

8. Kamaanaan Dhigin (Nabiyada) Jasad (Muuqaal) oon Cunayn Cunno Mana ahayn kuwo Waara.

وَمَا جَعَلْنَاهُمْ جَسَدًا آلِيًّا كَلُونَ أَطْعَامَ وَمَا
كَانُوا خَالِدِينَ ﴿٨﴾

9. Markaasna waxaan u Rumeynay Yabooonii waana Korinnay iyagii iyo Ciddaan Doono, waxaana Halaagnay Xadgubayaasha.

ثُمَّ صَدَقْنَاهُمُ الْوَعْدَ فَأَنْجَيْنَاهُمْ وَمَنْ نَشَاءُ
وَأَهْلَكْنَا الْمُسْرِفِينَ ﴿٩﴾

10. Waxaan idiin soo Dejinay Kitaab Sharaftiinnu ku Sugantahayee Miyeydaan Kasayn.

لَقَدْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكُمْ كِتَابًا فِيهِ ذِكْرُكُمْ أَفَلَا
تَعْقِلُونَ ﴿١٠﴾

11. Badanaana intaan Halaagnay Magaalo Dulmi Badan (Dadkeedu) oon Ahaysiinay Gadaasheed Qoom kale.

وَكَمْ قَصَمْنَا مِنْ قَوْمٍ كَانَتْ ظِلْمُهُمْ وَأَنْفُسَانَا
بَعْدَهَا قَوْمًا آخَرِينَ ﴿١١﴾

12. Markay kaseen Cadaabkanaga yey ahaayeen kuwo ka Carari.

فَلَمَّا أَحْسَبُوا أَنَّنَا إِذَا هُمْ مِنْهَا يَرْكُضُونَ ﴿١٢﴾

13. Ha cararina kuna noqda wixii laydiinku Raaxeeyey iyo Guryihiinna waxay u Dhawdahay in wax laydin warsadee.

لَا تَرْكُضُوا وَارْجِعُوا إِلَى مَا أُتْرِفْتُمْ فِيهِ وَمَسْكَلِكُمْ
لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٣﴾

14. Waxay Dhaheen Halaaganagee waxaan nahay Daalimiin.

قَالُوا إِنَّا نَبَأْنَا إِيَّاكُمْ نَاطِلِمِينَ ﴿١٤﴾

15. Saasna kuma tagin Qayladoooodu intaan ka yeello, wax la Shafay oo Bakhtiya.

فَمَارَاتِ تِلْكَ دَعْوَاهُمْ حَتَّىٰ جَعَلْنَاهُمْ حَصِيدًا
خَالِدِينَ ﴿١٥﴾

Illeen wuxuu u waxyooday Nabiyo Badan oo Rag ah oon Malaa'ig ahayn, wuxuuna faray in wax la weydiiyo Dadka Cilmiga iyo Aqoonta leh, Nabiyaduna waxbay Cuni Jireen ee ma ahayn Muuqaal aan wax Cunin, wayna Dhinteen.

Eebana wuxuu u Rumeeyey Yabooihiisii wuuna koriyey Cidduu Doono, wuxuuna Halaagi Xadgubayaasha, Quraankuna waa Sharafta Mu'miniinta Ciddii dulmi fashana waa la Halaagi waxaana lagu Badali Dad kale. Markay Dhibaataada Arkaanna way Carari, waxaana loo Dhihi ha Cararina ee Raaxadiinna ku Noqda iyo Guryihiinna waxbaa laydin Warsane, wayna Shaleytoon intay ka noqdaan Wax Ebar ah oo bakhti ah. Al-Anbiyaa' (7-15).

16. Maanaan Abuurin samooyinka iyo ﴿١٦﴾ وَمَا خَلَقْنَا السَّمَاءَ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا لِعَيْنٍ

Dhulka iyo waxa u Dhaxeeya Anagoo Ciyaari.

17. Haddaan Doono Madadaallo inaan yeelano waxaan ka yeelan lahayn Agta-nada haddaan Falayno.

لَوْ أَرَدْنَا أَنْ نَتَّخِذَ لَهَوًا لَآتَخَذْنَاهُ مِنْ لَدُنَّا إِنْ كُنَّا فَاعِلِينَ ﴿١٧﴾

18. Xaqaanse ku Gannaa Baadilka oo Tirtira markaasuu tagaa, waxaa idiinku Sugnaaday Halaag waxaad Sheegay-saan.

بَلْ نَقْذِفُ بِالْحَقِّ عَلَى الْبَاطِلِ فَيَدْمَغُهُ فَإِذَا هُوَ زَاهِقٌ وَلَكُمُ الْوَيْلُ مِمَّا تَصِفُونَ ﴿١٨﴾

19. Ilaahay waxaa u sugnaaday waxa Samooyinka ku sugan iyo Dhulka, kuwa Eebe Agtiisa ahna Iskama Ki-briyaan Cibaadadiisa kamana daalaan.

وَلَهُ مَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَنْ عِنْدَهُ لَا يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِهِ وَلَا يَسْتَحْسِرُونَ ﴿١٩﴾

20. wayna Nasahaan Habeen iyo Dha-rarba Kamana Noogaan.

يُسَيِّحُونَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٢٠﴾

21. Mise waxay yeesheen (Gaaladii) Ilaahayaal Dhulka Xaggiisa oo wax soo Nooleeya.

أَلَمْ تَتَّخِذْ أُولَئِكَ مِنَ الْإِنسَانِ الْمَذْمُومِ بَشِيرًا ﴿٢١﴾

22. Hadday Yihiin dhexdooda (Samada iyo Dhulka) Ilaahyo way Fasaadi La-haayeen, waxaa ka Nasahan Eebaha Carshiga leh waxay ku Tilmaami.

لَوْ كَانَ فِيهِمَا آلُ اللَّهِ فَسَادًا فَاسْتَجَبْنَا لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٢٢﴾

23. Lama warsanayo wuxuu Falo Iya-gase waa la Warsan.

لَا يَسْأَلُ عَمَّا يَفْعَلُ وَهُمْ يُسْأَلُونَ ﴿٢٣﴾

Ilaaheen wa ka Dheeryahay Ciyaar iyo Xumaanba, Cirka, Dhulka iyo Khalqiga kalana wuxuu u Abuuray Xaq iyo in Cid walba laga Abaal mariyo waxay kasbato. Malaa'igtuna iskama Waynayso Cibaadada Eebe, kamana Daalaan Habeen iyo Dharaar Nasihidiisa, wax isaga ka soo hadhay oo Ilaah ah oo wax nooleeyana ma jiro. Hadday Cirka iyo dhulka Joogaan Ilaahyo way Fasaadi lahaayeen oo Xumaan lahaayeen, maxaa yeelay midba waxbuu Doonilaha Markaasuu amarku iska hor imaan lahaa, Saas darteed Ilaaheennu waa kali, Wahella uma Baahna, Xumaanna waa ka Fogyahay, Sharafna isagaa iska leh, wuxuu doonana wuu falaa, cid warsanna ma jirto. Ruuxii Caqli Daroo iyo Islawayni aan meel jirin udiidana waa Jaahil aan wax ogayn lana kulmi Abaalkiisa.

Saas darteed waa in si dhab ah loo Caabudo Eebe kaliya. Al-Anbiyaa'(16-23).

24. Mise waxay Yeesheen Eebe ka sokow Ilaahyo, waxaad Dhahdaa keena Xujadiinna, kani waa (quraanka) sheegi waxa ila jooga iyo sheegiddii kuwii iga horreeyey, Badidoodse ma oga Xaqa wayna ka Jeedsan.

أَلَمْ تَتَّخِذُوا مِنْ دُونِهِ آلِهَةً قُلْ هَانُوا بَرَاهِنَتِكُمْ هَذَا إِنْ كُنْتُمْ مَعِيَ زِدْكُمْ مِنْ قَبْلِ بَلْ أَكْذَبْتُمْ وَلَا تَعْلَمُونَ الْحَقَّ أَنَّهُمْ مُعْرِضُونَ ﴿٢٤﴾

25. Rasuulkaan hortaa dirayba waxaan u waxyoonaay ku xaq lugu caabudo aan Ani ahayn ma jiro ee I caabuda.

وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ مِنْ رَسُولٍ إِلَّا نُوحِيَ إِلَيْهِ
أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا أَنَا فَاعْبُدُونِ ﴿٢٥﴾

26. waxay dhaheen Gaaladii wuxuu Yeeshay (Eebaha) Raxmaana Ilmo, waa ka Nasahanyahay, waase Addoomo (Malaa'igtu) la Sharrifo.

وَقَالُوا اتَّخَذَ الرَّحْمَنُ وَلَدًا سُبْحَانَ رَبِّكَ
عَبَادٌ مُكْرَمُونَ ﴿٢٦﴾

27. kagama hor maraan Hadal iyaguna Amarkiisay ku Camalfalaan.

لَا يَسْتَفِيدُونَهُ رَبُّ الْقَوْلِ وَهُمْ بِأَمْرِهِ
يَعْمَلُونَ ﴿٢٧﴾

28. wuxuu ogyahay waxa hortooda iyo Gadaashooda ah umana shafeecaan Ciduu ka raaliyahay mooyee iyaguna Cabsidiisay la Baqaan.

يَعْلَمُونَ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ
وَلَا يَشْفَعُونَ إِلَّا لِمَنْ أَرْضَىٰ وَهُمْ مِنْ
حَسْبِيِّهِ ﴿٢٨﴾

29. ruuxii dhaha oo ka mid ah Malaa'igta anaa Ilaah ah Eebe ka sokow, kaas waxaannu ku Abaal marin Jahannamo, saasaana ku Abaal amrinnaa Daalimiinta.

* وَمَنْ يَقُلْ مِنْهُمْ آوَيْتُ إِلَى اللَّهِ مِنْ دُونِهِ
فَذَلِكُمْ جَزَاءُ الَّذِينَ كَذَبُوا بِالْحَقِّ لَعْنَةُ
اللَّهِ عَلَيْهِمْ وَأَعْدَائِهِمْ أُولَٰئِكَ فِي
السُّعُورِ ﴿٢٩﴾

Eebe waa kali wax ka soo hadhay oo Ilaah ahna ma jiro, saasaana ku qoran Quraanka iyo Kutubtii ka Horraysayba, Rasuul kastana wuxuu Eebe u waxyooday in Ilaahay kali yahay lana Caabudo. Malaa'igtuna Ilmo uma aha Alle, waase addoomo sharaf leh, oon Eebe Caasiyayn, uuna ogyahay waxay fali iyo xaalkoodaba, waxay u shfeecina ma jiro Cid Eebe ka raalli noqday mooyee, isaga unbayna ka yaabaan, kana Cabsadaan, Ciddii Ilaahnimo sheegatan Eebe ka sokow wuxuu Ilaahay ku abaal marin Naarta Jahannamo, saasuuna ku abaalmaryaa Daalimiinta, saas darteed Eebeha Xaqa ah wax Dila, wax Nooleeyca; wax Arzuqa, Roobka keena, sharciga, Loo wada baahanyahay ka kaaftooma Dadka waa uun Ilaheena Awoodda leh. Al-Anbiyaa' (24-29).

30. miyeyna arkayn kuwii Gaaloobay in Samooyinka iyo dhulku ahaayeen kuwo isku dhaggan oona kala Bixinay, kana yeelay Biyaha wax kasta oo Nool ee miyeyna Rumaynayn.

أُولَٰئِكَ الَّذِينَ كَفَرُوا وَأَنْ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ
كَيْتَابًا ثُمَّ نَفَقْنَا فِيهِمَا صُبْحًا وَجَعَلْنَا
مِنْ الْمَاءِ كُلَّ شَيْءٍ حَيٍّ أَفَلَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٠﴾

31. waxaana yeellay Dhulka Sugayaal (buuro) inayna la iilanin Dadka, waxaana yeellay Dhexdeda Karimo Waddooyin ah, inay ku Toosaan.

وَجَعَلْنَا فِي الْأَرْضِ رَوَاسِيًا أَنْ تَمِيدَ
بِهِمْ وَجَعَلْنَا فِيهَا فِجَاجًا سُبُلًا لَعَلَّهُمْ
يَهْتَدُونَ ﴿٣١﴾

32. waxaana ka yeelay Samada Saanqaaf ilaashan iyaguna Calaamooyinkeeda way ka jeedsan.

وَجَعَلْنَا السَّمَاءَ سَفْعًا مَحْفُوظًا وَهُمْ
عَنِهَا مُعْرِضُونَ ﴿٣٢﴾

33. Eebe waa kan Abuuray Habeenka, Maalinta, Qorraxda iyo dayaxa mid kastana Falag buu Dhexdabbaalan.

وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ كُلٌّ فِي فَلَكٍ يَسْبَحُونَ ﴿٢٣﴾

34. maanan yeelin Dadka ka horreeyey kuwo waara ee haddaad dhimato ma iyagaa waari (Gaaladu).

وَمَا جَعَلْنَا لِلْبَشَرِ مِنْ قَبْلِكَ الْخَلْدَ أَقَابِينَ مَتَّعَهُمُ الْخَلَائِدُونَ ﴿٢٤﴾

35. Naf kastaa waxay dhadhamin Geeri waxaana idinku Imtixaami Shar iyo Khayr Ibtilo darteed, xagganagaana laydiin soo Celin.

كُلُّ نَفْسٍ ذَائِقَةُ الْمَوْتِ وَنَبِّئُوهُمْ بِالنَّارِ وَالْخَيْرِ فَتَنَةً وَإِنَّا نُرْجِعُونَ ﴿٢٥﴾

Ilaahay wuxuu ka warrami awooddiisa weyn iyo in Cirka, Dhulka, ahaayeen kuwo isku dhaggan Eebaana ka keenay Roobka iyo dooga, wax kastoo Noolna Biyo ka ahaaday, Dhulkana Buura yeelay si dhulka loogu Sugo, looguna Taago, cirkana ka yeelay Saanqaaf Ilaashan, Habeenka, dharaarta, Qorraxda iyo Dayaxana Falagood iyo Meeshooda u Sahlay. Tan kale cid waari oo Dad ah ma jirto, ee Ruux walba wuu dhiman, waxaase loo baahayahay Camal Fiican ee ma haboona in Geerida cidda Wanaagga fali la Jeclaado.

Rasuulkuna (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelec) wuxuu yidhi: Wax walba waxaa laga Abuuray Biyo. Waxaa sheegay Imaam Axmed.

Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi: Waxaa laysku Imtixaami Shar, Dhibaato, Barwaaqo, Caafimaad, Cudur, Hodan, Saboolnimo, Xalaal, Xaaraan, Daaco, Macsiyo, Hanuun iyo baadi. Al-Anbiyaa'(30-35).

36. markay ku arkaan kuwii Gaaloobay waxay kaa yeeshaan jeesjees iyagoo dhihi ma kanaa kan sheegi Ilaahyihiinna iyagoo ka gaaloobi xusidda Eebaha Raxmaana.

وَإِذْ آتَاكَ الْوَالِدِينَ كَفَرُوا وَإِن يَتَّخِذُواكَ إِلَّا هُرُوقًا أَلْدَىٰ يَذُكْرَ الْهَاتِكُمْ وَهُمْ يَذُكْرُ الرَّحْمَنِ هُمْ كَفَرُونَ ﴿٢٦﴾

37. waxaa laga abuuray Dadka Deg deg, waxaana idin tusin Aayaadkayga ee ha degdegina.

خُلِقَ الْإِنْسَانُ مِنْ عَجَلٍ سَأُورِيكُمْ آيَاتِي فَلَا تَسْتَعْجِلُونِ ﴿٢٧﴾

38. waxay dhihi waa goorma Yabooonii (Cadaabku) haddaad run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَذَا الْوَعْدُ إِن كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٢٨﴾

39. hadday ogyihiin kuwii Gaaloobay markaan laga reebeyn Wajiyadooda Naarta iyo Dhabarkooda oon loona gargaarayn (ma degdegsadeen).

لَوْ يَعْلَمُ الَّذِينَ كَفَرُوا حَيْثُ لَا يَكْفُرُونَ عَنْ وُجُوهِهِمُ النَّارُ وَلَا عَن ظُهُورِهِمْ وَلَا هُمْ يُبْصِرُونَ ﴿٢٩﴾

40. waxayse ugu imaan (naartu) si kada ah wayna wareerin mana karayaan Celinteeda Lamana Sugo.

بَلْ تَأْتِيهِمْ بَغْتَةً فَتَبْهَتُهُمْ فَلَا يَسْتَيْطِعُونَ رَدَّهَا وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٣٠﴾

41. waxaa lagu jees jeesay Rasuullo kaa horreeyey waxaana ku dhacay kuwii ku

وَلَقَدْ أَسْهَرْنَا بِرُسُلِنَا مِنْ قَبْلِكَ فَحَاقَ بِالَّذِينَ

jees jeesay oo Gaalada ah waxay ku jees jeesi jireen.

سَخَرُوا مِنْهُمْ مَا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ ﴿٤١﴾

42. waxaad dhahdaa yaa idinka Ilaalin Habeen iyo Dharaarba Eebaha Raxmaana waxayse iyagu ka jeedsan Xusidda Eebahood.

قُلْ مَنْ يَكْفُرْ كُفْرًا بِآلِئِيلٍ وَالنَّهَارِ مِنَ الرَّحْمَنِ
بَلْ هُمْ عَنْ ذِكْرِ رَبِّهِمْ مُعْرِضُونَ ﴿٤٢﴾

43. ma waxaa u sugnaaday Ilaahyonaga celin ma karaan (waxay caabudi) Gargaarka Naftooda nalagamana Magan galiyo.

أَمْ لَهُمْ آلِهَةٌ تَمْنَعُهُمْ مِنْ دُونِنَا
لَا يَسْتَطِيعُونَ نَصْرَ أَنفُسِهِمْ وَلَا هُمْ مِنَّا
يُصْحَبُونَ ﴿٤٣﴾

Ma habboona in Cid Xaqa u yeedhi lagu jees jeeso, isagoo xaqa la diidi. Dabecadda Dadkana waxaa ka mid ah inay Dag dagaan oo wax dheerayaan, waxaase imaan Maalin Gaalo wax cadaab ka baajin jirin, cadaabna ugu imaan kado, oyna arki Cidhibta xumaanta, wax Eebe Dadka ka ilaalinna ma jiro Habeen iyo Maalin midna wax Eebe ka soo hadhay oo wax reebina ma jiro, maxaayee ay iyagaanba naftooda wax u tarin, hadalkana wuxuu ku uruursanyahay Awoodda Eebe, Tabar yari iyo Baahida Dadka. Al-Anbiyaa' (36-43).

44. Saas ma aha ee waxaan u Raaxaynay kuwaas iyo Aabayaalkood Intuu ku Dheeraado Cimrigu, Miyeyna Arkayn Inaannu ku imanayno Dhulka Anagoo Nusqaamin (Guusha Islaamka) Miyagaa Adag.

بَلْ مَتَّعْنَا هَؤُلَاءِ وَآبَاءَهُمْ حَتَّى طَالَ عَلَيْهِمُ
الْعُمُرُ أَفَلَا يَرَوْنَ أَنَّا نَأْتِي الْأَرْضَ
نَنفُصُهَا مِنْ أَطْرَافِهَا أَفَهُمُ الْغَالِبُونَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaad Dhahdaa waxaa uun aan idiinku Digi Waxyiga Mana Maqlo Dhagoole Dhawaaqa marka loo Digi.

قُلْ إِنَّمَا أُنذِرُكُمْ بِالْوَحْيِ وَلَا يَسْمَعُ الصُّعْدُ
الدُّعَاءَ إِذَا مَا يُنذَرُونَ ﴿٤٥﴾

46. Hadduu Taabto wax Yar oo Cadaabka Eebahaa ah waxay Odhan Halaaganagee Anagaa Daalimiin ah.

وَلَيْنَ مَسْتَهْزِئِهِمْ نَذْحَةٌ مِنَ عَذَابِ رَبِّكَ لَيَقُولُنَّ
يَبْرَأْنَا إِنَّا كُنَّا ظَالِمِينَ ﴿٤٦﴾

47. Waxaannu u Dejinaynaa Miisaanka Caadilka ah Maalinta Qiyaame laga mana Dulmiyo Naf waxba, haba ahaado wax la eg Xabbad Khardal ah (wax yar) ee waan siinaynaa, annagaana ugu Filan Xisaabiye.

وَصَبَّحُوا الْمَوْرِدَ مِنَ الْفَيْسَمَةِ لِيَوْمِ الْقِيَامَةِ فَلَا تُغْنِيهِمْ
نَفْسٌ شَيْئًا وَلَا نَكَانَ مِثْقَالَ حَبَّةٍ مِنْ حَرْدَلٍ
أَتَيْنَاهُمُ وَكَفَرُوا بِتِلْكَ آيَاتِنَا ﴿٤٧﴾

48. Dhab ahaan yaan u siinay (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Haaruun kala Bixiye (Tawreed) iyo Nuur iyo waanada kuwo Dhawrsada.

وَأَلْقَيْنَا آتَيْنَا مُوسَى وَهَارُونَ الْفُرْقَانَ وَضِيَاءَهُ
وَزَيْكُرًا لِلْمُتَّقِينَ ﴿٤٨﴾

49. Oo ah kuwa ka Cabsada Eebahood iyagoo kali ah iyagoo Saacadda (Qiyaame) ka Cabsan.

الَّذِينَ يَحْتَسِبُونَ أَنَّهُمْ بِالْغَيْبِ وَهُمْ مِنَ السَّاعَةِ مُشْفِقُونَ ﴿٤٩﴾

50. Kan (Quraankuna) waa Quraan la Barakeeyey oon Soo Dejinay ee midin-kaa Diidi Isaga.

وَهَذَا ذِكْرٌ مُّبَارَكٌ أَنزَلْنَاهُ أَفَأَنْتُمْ لَهُ مُنْكَرُونَ ﴿٥٠﴾

Gaalada waxaa Xumaanta ku Qaaday ku Raaxaysiga Adduunka, waase inay ku Waano Qaataan Faafidda Islaamka iyo Guusha. Waxaase Jirta inaan Cid Dhuntay Hanuunin karin, Markuuse Taabto Ciqaab Yar Yey Calaalacalaan oo dhawaaqaan, Eebaase Miisaan Caddaalada Joojin Maalinta Qiyaame, Cid la Dulminna ma jirto, Eebahaana ku Filan Xisaab. Nabi Muuse iyo Nabi Haaruunna wuxuu Siyey Eebe Kitaabkii Tawreed, oy ku Hanuuniyeen kuwa Eebe ka yaaba, Quraankuna waa kitaab la Barakeeyey Cidii Diida Umbaase Khasaartay oo dhuntay Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Laba Kalimo oo u fudud Carrabka kuna Culus Miisaanka Eebana Jecelyahay waa: waxaa Nasahan oo Mahdsan Allaah waxaa nashan Allaha weyn. Waxaa Wariyey Bukhaari iyo Muslim. Al-Anbiyaa' (44-50).

51. Dhab ahaan waxaan u Siinay Nabi Ibraahim Hanuunkiisa mar hore anagaana Ogayn.

﴿ وَلَقَدْ آتَيْنَا إِبْرَاهِيمَ رُشْدَهُ مِن قَبْلُ وَكُنَّا بِهِ عَالِمِينَ ﴿٥١﴾

52. Markuu ku Yidhi Aabihiis iyo Qoomkiisii waa maxay Sawiradan aad ku kor Negidihiiin (Caabudaysaan).

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِ مَا هَذِهِ التَّمَاثِيلَ الَّتِي أَنْتُمْ لَهَا عَاكِفُونَ ﴿٥٢﴾

53. waxay Dheheen waxaan Helay Aabayaalkanno oo Caabudi.

﴿ قَالُوا وَجَدْنَا نَاءَ آبَاءِنَا لَهَا عَابِدِينَ ﴿٥٣﴾

54. Wuxuu yidhi (Nabi) Ibraahim waxaad ku Sugantihiiin idinka iyo Aabayaalkiin Baadi Cad.

﴿ قَالَ لَقَدْ كُنْتُمْ أَنْتُمْ وَآبَاؤُكُمْ فِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ ﴿٥٤﴾

55. waxay Dheheen ma waxaad Noola Timid Xaq Mise Adigu waxaad kamid Tahay kuwa Ciyaari.

﴿ قَالُوا اجْعَلْنَا مِثْلَهُ لَمَّا جَاءَنَا بِالْحَقِّ أَفَأَنْتُمْ مِنَ اللَّاعِبِينَ ﴿٥٥﴾

56. Wuxuuna Yidhi Eebihiiin waa Eebaha Samooyinka iyo Dhulka ee ah Kan Abuuray Aniguna Arrintaas yaan ahay kuwa ka Marag Kici.

﴿ قَالَ بَلْ رُبُّكُمْ رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ الَّذِي فَطَرَهُنَّ وَأَنَا عَلَىٰ ذَٰلِكُمْ مِنَ الشَّاهِدِينَ ﴿٥٦﴾

57. Eebaan ku Dhaartaye waan Dhagri Sanamyadiinna ka Dib markaad Jeedsataan Idinkoo Tagi.

﴿ وَتَاللَّهِ لَأَكِيدَنَّ أَصْنَامَكُمْ بَعْدَ أَنْ تُولُوا مَدْيَنَ ﴿٥٧﴾

58. Wuxuuna ka Yeelay Burbur, Koodii waynaa mooye inay Xaggiisa u Noqdaan (Inuu Jajabiyey Isagu).

﴿ فَجَعَلَهُمْ جُدَادًا ۖ الْأَكِيدُ لَهُمْ لَعَلَّهُمْ إِلَيْهِ يَرْجِعُونَ ﴿٥٨﴾

59. waxay Dheheen yaa ku falay Sidan Ilaahyadanadii Kaasi waa Daalime.

قَالُوا مَنْ فَعَلَ هَذَا بِإِلَهِنَا إِنَّهُ لَمِنَ
الظَّالِمِينَ ﴿٥٩﴾

60. waxayna Dheheen Waxaan Maqal-lay Wiil Sheegi lana Dhaho Ibraahim.

قَالُوا سَمِعْنَا فَتَىٰ يَدْعُنَا لِوَلِيِّهِ ﴿٦٠﴾

61. waxay Dheheen keena dadka Indhi-hiisa inay ka Marag Furaan.

قَالُوا فَأَنَّىٰ يَدْعُنَا إِذْ نَحْنُ لِنَاسٍ لَعَلَّهُمْ
يَشْهَدُونَ ﴿٦١﴾

Nabi Ibraahim Eebaa Hanuuniyey Mar hore, wuxuuna ka reebay Qoomkiisii iyo Aabihiisba waxay Caabudayeen ee Eebe ka Soo Hadhay, wayse ku Madax Adayeen Inkastoos u Caddeeyey Kalinimada Eebe iyo Awooddiisa, markuu ka Daalayna wuxuu Jajabiyeey waxay Caabudayeen Kii u Weynaa Mooyee inay u noqdaan isaga, marday is warsadeen Cidda Saas yeeshayna waxay isu Sheegeen inuu Ibraahim yahay, waxayna horkaceen Dadkii si loo Arko oo loogu marag Furo. Al-Anbiyaa' (51-61).

62. waxay Dheheen Gaaladii Maadaa ku Falay Sidan Ilaahyadannada Ibraahimow.

قَالُوا أَأَنْتَ فَعَلْتَ هَذَا بِإِلَهِنَا يَا بَرَاهِيمَ ﴿٦٢﴾

63. Wuxuu Yidhi waxaa Falay Kooda Weyn ee Kana, Waydiiya Hadday Hadli.

قَالَ بَلْ فَعَلَهُ بَرِيءٌ مِّمَّكَ هَذَا فَتَسْأَلُوهُمْ
إِنْ كَانُوا يَنْطِقُونَ ﴿٦٣﴾

64. Markaasay u Noqdeen Naftooda waxayna Isu Dhaheen war Idinkaa Daalimiina.

فَرَجَعُوا إِلَىٰ أَنفُسِهِمْ فَقَالُوا إِنَّكُمْ أَنْتُمُ
الظَّالِمُونَ ﴿٦٤﴾

65. Markaasaa Loogadiyey Madaxooda (waxayna Dahaheen) Dhabbaad u Ogtahay inayna kuwani Hadlayn

ثُمَّ نَكَّسُوا عَلَىٰ رُءُوسِهِمْ لَقَدْ عَلِمْتُمْ مَا هُمْ
بِیَنْطِقُونَ ﴿٦٥﴾

66. Wuxuu Yidhi ma waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow waxaan Idin Anfacyayn waxba idinna Dhibayn.

قَالَ أَتَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ مَا لَّا
يَفْعَلُكُمْ شَيْئًا وَلَا يَضُرُّكُمْ ﴿٦٦﴾

67. Ufbaa laydin Yidhi Idinka iyo Waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow Miyeydaan wax kaseyn.

أَفِي لَكُمْ وَلِمَا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ أَفَلَا
تَعْقِلُونَ ﴿٦٧﴾

68. waxay Dhaheen Guba una Gargaara Ilaahyadiinna Haddaad wax Falay-saan.

قَالُوا احْرَقُوهُ وَأَنْصُرُوا إِلَهَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ
فَاعِلِينَ ﴿٦٨﴾

69. Waxaan Nidhi Naaray u Noqo Qabow iyo Nabadgalyo Ibraahim.

فَلَمَّا يَسُدَّ كُفُوهُ إِسْرَءِيلَ وَسَلَّمَ عَلَىٰ إِبْرَاهِيمَ ﴿٦٩﴾

70. waxay la Dooneen Dhagar waxaana ka yeellay kuwo Khasaaray.

وَأَرَادُوا بِهِ كَيْدًا فَجَعَلْنَاهُمُ الْأَخْسَرِينَ ﴿٧٠﴾

Nabi Ibraahim markuu ka Garhelay Gaaladii Hadal Cadna ku Yidhi yey Goosteen inay Gubaan oo Dab ku Tuuraan, Taasina waa Caadada Jaahiliinta in marka lagga Gar helo Mu'miniinta ku Jeedsadaan Xumaana u Maamulaan, Eebaase ka Nabadgaliyey Dhagartii, kana Koriyey Dabkii, Gaaladii iyo Waxay Caabudayeenna Khasaare ku Dambaysiiyey, Wuxuuna Xusay Nabi Ibraahim Eebe markii lagu Tuuray Dabka. Ibnu Cabbaas Wuxu Yidhi: «Waxaa i kaafiya Eebe Isagaana u Fiican Wakiil» Waxaa yidhi Nabi Ibraahim markii Dabka lagu Tuuray, Nabiga Muxamed ahna Eebe ha Nabadgaliyee Markii lagu Yidhi Dadkiibaa Idiin Kulmay, Waxaa wariyey Bukhaari. Taasina waxay ku tusin in Xaqu Sarrayn Guulaysanna markii si Dhab ah Eebe loogu Xidhnaado lana Caabudo. Al-Anbiyaa' (62-70).

71. Waannu u Korinay (Nabi) Ibraahim iyo Nabi Luud Dhulkii aan u Barakaynay Caalamka (Shaam).

وَجَعَلْنَاهُ لوطًا إِلَى الْأَرْضِ الَّتِي بَارَكْنَا فِيهَا
لِلْعَالَمِينَ ﴿٧١﴾

72. Waxaan Siinay Isxaaq iyo Yacquub oo Siyaada ah, waxaana ka Yeellay Dhammaan kuwo Suuban.

وَوَهَبْنَا لَهُ إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ نَافِلَةً وَكُلًّا
جَعَلْنَا صَالِحِينَ ﴿٧٢﴾

73. waxaana ka yeellay Imaamyo ku Hanuuniya Amarkanaga, waxaana u waxyoonyay Falidda Khayrka, Oogidda Salaadda iyo Bixinta Sakada waxayna ahaayeen kuwo Na caabuda.

وَجَعَلْنَاهُمْ أَيْمَةً يَهْتَدُونَ بِأَمْرِنَا وَأَوْحَيْنَا
إِلَيْهِمْ فَعَلُوا الْخَيْرَاتِ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا
الزَّكَاةَ وَكَانُوا لَنَا عَبِيدِينَ ﴿٧٣﴾

74. (Nabi) Luudna waxaan Siinay Xukun iyo Cimi, waxaana ka Korinay Magaalaadii ahayd mid Fasha Xumo waxay ahaayeen Qoom Xun oo Faasinqiina.

وَلوطًا آتَيْنَاهُ حُكْمًا وَعِلْمًا وَجَعَلْنَاهُ مِنَ
الْقَوْمِ الَّتِي كَانَتْ تَعْمَلُ الْفَسِيْقَاتِ إِنَّهُمْ كَانُوا
قَوْمًا سَوِيًّا فَسِيْقِينَ ﴿٧٤﴾

75. waxaana Galinay Naxariistanada, wuxuuna ka mid ahaa kuwa Suuban.

وَأَدْخَلْنَاهُ فِي رَحْمَتِنَا إِنَّهُ مِنَ الصَّالِحِينَ ﴿٧٥﴾

76. (Nabi) Nuuxna waa Korinay, markuu Dhawaaqay mar hore, waana ajiibnay, waana ka Korinay isaga iyo Ehelkiisaba Murugadii Waynayd.

وَنُوحًا إِذْ نَادَى مِنْ قَبْلُ فَاسْتَجَبْنَا
لَهُ وَجَعَلْنَاهُ وَأَهْلَهُ مِنَ الْكَرْبِ
الْعَظِيمِ ﴿٧٦﴾

77. waana uga Gargaaray Qoomkii Beeniyeey Aayaadkanaga, waxayna ahaayeen Qoom Xun waana Maanshaynay Dhammaantood.

وَنَصْرَنَاهُ مِنَ الْقَوْمِ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا
إِنَّهُمْ كَانُوا قَوْمًا سَوِيًّا فَاعْرِضْهُمْ أَحْمَدِينَ ﴿٧٧﴾

Aayadahanna waxay ka warrami Qaar ka mid ah Nabiyadii Sida Nabi Ibraahim, Luud, Isxaaq, Yacquub iyo Nuux, iyo sida Eebe uga Koriyey Qoomamkoodii Daalimiinta ahaa ee Xaqa ka Jeedsaday kana Madax Adaygay, Cidhibtii Fiicnaydna waxay u Hadhay Nabiyadii iyo Mu'miniintii Xaqa ku Raacday, Khasaare iyo Halaagna wuxuu u Dambeeyey Gaaladii Xaqa Diday. Warka Nabiyadaasna meelo Badan oo Quraanka ah Yuu ku Faah Faahsanyahay, Waxaase Muhiim ah in lagu Waano Qaato Xaqana la Raaco. Al-Anbiyaa' (71-77).

78. Xusuuso (Nabi) Daawuud iyo (Nabi) Suleymaan markay Xukumayeen Beerta markuu Daaqay Adhi Qoom (Dad) waxaana ahayn kuwa Xukunkooda u Maraga (Arka).

وَدَاوُدَ وَسُلَيْمَانَ إِذْ يَحْكُمَانِ فِي الْحَرْثِ
إِذْ نَفَقَتْ فِيهِ غَنَمُ الْقَوْمِ وَكَانَ الْحَاكِمِينَ
شَاهِدِينَ ﴿٧٨﴾

79. waxaana Fahansiinay Sulaymaan, Dhammaanna waxaan Siinay Xukun iyo Cilmi, waxaana u Sakhirray Daawuud Buuraha iyogoo la Tasbiixsan iyo Shimbiraha, waana Fallaa «karraa».

فَقَهَّمْنَاهَا سُلَيْمَانَ وَكُلِّدْنَا إِيَّانَا حُكْمًا وَعِلْمًا
وَسَخَّرْنَا مَعَ دَاوُدَ الْجِبَالَ يُسَبِّحْنَ وَالطَّيْرَ
وَكَانَ فَاعِلِينَ ﴿٧٩﴾

80. waxaana Barray Daawuud Samaynta Duruucda inay Idinka Dhawrto Dagaalkiina, ee ma Tihiin kuwo Mahadin.

وَعَلَّمْنَاهُ صَنْعَةَ لَبُوسٍ لَّكُمْ لِيُحِصِبَكُمْ مِنَ
بَأْسِكُمْ فَهَلْ أَنْتُمْ شَاكِرُونَ ﴿٨٠﴾

81. Suleymaanna waxaan u Sakhirray Dabaysha iyadoo Daran oo ku Socota Amarkiisa Xaggii Dhulkii ahaa kaan Barakavy Dhexdiisa, waxaana Na hay Kuwo wax walba Og.

وَلِسُلَيْمَانَ الرِّيحَ عَاصِفَةً تَجْرِي بِأَمْرِهِ إِلَى الْأَرْضِ
الَّتِي بَرَكَتْنَا فِيهَا وَكُنَّا بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمِينَ ﴿٨١﴾

82. Shaydaamadana, waxaan uga Sakhirray Kuwo u Dhumban (Badda), una Fala Camal aan kaas ahayn Anaggaana Ilaalinna.

وَمِنَ الشَّيْطَانِ مَنْ يَغْوِي صَوْتَهُ، وَيَعْمَلُونَ
عَمَلًا دُونَ ذَلِكَ وَكُنَّا لَهُمْ حَافِظِينَ ﴿٨٢﴾

Sidoo kale Daawuud iyo Wiilkiisii Nabi Sulaymaan Iyagana Quraanku Meeluu kaga Hadlay, Mid walbana Wuxuu Eebe Siiey Xukun iyo Cilmi, waxaana loo Sahlay Daawuud, Buuraha, Shimbiraha iyo Sameynta Qalbka Dagaalka, Sidoo kale waxaa loo Fududeeyey Nabi Suleymaan Dabaysha oo ku Sucon Amarkiisa iyo Shayaadiinta kuwo ka Shaqeeya Bad iyo Shaqa kalaba. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe kordiisa ha yeclee) Wuxuu Yidhi: Garsoorayaashu waa Seddex, Mid Janaduu Gali, Labana Naarta, Midka Xaqa oo Xukuma Jannaduu Gali, Mid Jaahilnimo wax ku Xukuma Naartuu Gali, Mid Xaqa yaqaan oo Xukuma wax ka Duwanna Naartuu Gali. Taasina waxay ku Tusin Ahmiyadda Cadaaladda iyo in Dadku ku Qaybsami, ama Janno ama Naar. Al-Anbiyaa' (78-82).

83. (Xusuuso) Ayuubna markuu u Dhawaaqay Eebihis (Isagoo Dhihi) Aniga waxaa I taabtay Dhib Adiguna waxaad Tahay Naxariis Badane.

﴿ وَأَنْبُوبَ إِذْ نَادَى رَبَّهُ وَأَنَّى الْمَسِينُ الضُّرُّ
وَأَنْتَ أَرْحَمُ الرَّحِيمِينَ ﴿٨٣﴾

84. waana Ajiibnay waxaana ka Faydnay waxa Haya oo Dhiba, waxaana Siinay Ehelkiisii iyo wax la mid ah Naxariis Xagganaga ah Darteed iyo waanada Caalamka.

فَأَسْتَجِبْنَا لَهُ، وَكَفَفْنَا أَمْرَهُ، مِنْ ضُرِّ
وَأَنْبُوتَهُ أَهْلَهُ، وَوَسَّوْهُمْ مَعَهُمْ رَحْمَةً مِنْ
عِنْدِنَا، وَذَكَرْنَا لِلْعَالَمِينَ ﴿٨٤﴾

85. Xusuuso Ismaaciil, Idiris, Dulkifli Dhammaan waxay ka mid ahaayeen kuwa Samra.

وَأَسْعِلْ إِدْرِيْسَ وَذَا الْكِفْلِ كُلِّ مِّنَ
الضَّالِّينَ ﴿٨٥﴾

86. waxaana Dhex galinay Naxariis tanada waxayna ka Mid ahaayeen kuwa Suuban.

وَأَدْخِلْنَهُمْ فِي رَحْمَتِنَا إِنَّهُمْ مِّنَ
الضَّالِّينَ ﴿٨٦﴾

87. Nabi Yuunus (Xusuuso) markuu Tagay isagoo Cadhaysan una Maleeyey Inaannaan Cidhiidhyayn korkiisa oo uu ku Dhawaaqay Mugdiyada Dhexdooda Ilaah Xaq lugu cabudoo aan adi Ahayn ma Jiro, Nasahnaantaada Anigu wa-xaan ka Mid ahaa kuwa Daalimiinta ah.

وَذَا النُّونِ إِذْ ذَهَبَ مُغْتَضِبًا فَظَنَّ أَن لَّنْ
نَقْدِرَ عَلَيْهِ فَنَادَى فِي الظُّلُمَاتِ أَن لَّا إِلَهَ
إِلَّا أَنْتَ سُبْحَانَكَ إِنِّي كُنْتُ مِنَ
الظَّالِمِينَ ﴿٨٧﴾

88. waana Ajiibnay kana Korinay Muruggtii, Saasaana u Korinaa Mu'miiniinta.

فَأَسْجَبْنَا لَهُ وَبَيَّنَّا لَهُ مِنَ الْعَمَىٰ وَكَذَلِكَ
نُجِى الْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٨﴾

89. Zakariyana (Xusuuso) markuu u Dhawaaqay Eebihis isagoo leh Eebow hayga Tagin Anoo Kale ah Adaa u Khayrroon Cid wax Dahaxashee «u hadhee».

وَرَكَّابًا إِذْ نَادَى رَبَّهُ رَبِّ لَا تَذَرْنِي فَرْدًا
وَأَنْتَ خَيْرُ الْوَارِثِينَ ﴿٨٩﴾

90. waana Ajiibnay waxaana Siinay Yaxye waxaana u Haggaajinay Haweenaydiisii, waxayna ahaayeen kuwo u Deg dega Khayraadka oo Na barya iyagoo Rajayn oo Cabsan waxayna ahaayeen kuwa Noo Khushuuca.

فَأَسْجَبْنَا لَهُ وَوَهَبْنَا لَهُ يَحْيَىٰ
وَأَصْلَحْنَا لَهُ وَرَوْحَهُ إِنَّهُمْ كَانُوا
يُسرِعُونَ فِي الْخَيْرَاتِ وَيَدْعُونَنَا رَعَبًا
وَرَهَبًا وَكَانُوا لَنَا خَشِيعِينَ ﴿٩٠﴾

Aayadahan waxay ka Warrami Xaalkii Nabiyadaas iyo sida Eebe U Ajiibay Dhammaantood ugana Koriyey Dhibkii, Saasaana Eebe Aqbalaa Baryada Dadka Dhibban ee Wanwanaagsan, waxaana Shardi ah in si Dhab ah loo Caabudo Eebe Looguna Hogaansamo Xaqana la raaco Xumaanna laga Fogaado. Al-Anbiyaa' (83-90).

91. Tiina (Xusuuso) Dhawrtay Xubinteeda waa (maryama) oon ku Afuufnay Dhexdeeda Ruuxdannadii Ugana yeelnay caalamka iyada iyo Wiilkeeda calaamad.

وَالْوَيْلُ لَأَحْصَيْنَتْ فَرَجَهَا فَنَفَخْنَا فِيهَا مِن
رُّوحِنَا وَجَعَلْنَاهَا وَأَبْنَاهَا آيَةً
لِّلْعَالَمِينَ ﴿٩١﴾

92. Tani waa Diintiinii waana Diin kaliya Aniguna waxaan Ahay Eebiihin ee I caabuda.

إِنِّ هَذِهِ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً
وَأَنَا رَبُّكُمْ فَاعْبُدُونِ ﴿١٢﴾

93. waxayse isku Khilaafeen Amarkoodii Dhexdooda Dhammaanna Xagay-gaa loo soo Celin.

وَتَقَطَّعُوا أَمْرَهُمْ بَيْنَهُمْ كُلُّ إِلَهِنَا
رَاجِعُونَ ﴿١٣﴾

94. Ruuxii Fala Wanaag isagoo Mu'min ah lagama Qariyo Camalkiisa Anaguna waan u Qoraynaa.

فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْرَ الصَّلِحَاتِ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَا
كُفْرَانَ لِسَعْيِهِ وَإِنَّا لَهُ كَاتِبُونَ ﴿١٤﴾

95. Waxaa ka Reebban Magaalo aan Halaagnay inay soo Noqoto «Soo bixin ka hor».

وَحَزَرْنَا عَلَىٰ قَرِينَةٍ أَهْلَكْنَا نَهَا أَنْهَمُ
لَا يَرْجِعُونَ ﴿١٥﴾

96. Inta laga Furi soo (Dayn) Yaajuuj iyo Maajuuj iyaguna Jaho Sarreysa Dhaammanteed yey ka soo Deg degi.

حَتَّىٰ إِذَا فُجِحَتْ يَأْجُوجُ وَمَأْجُوجُ وَهُمْ مِمَّنْ
كُلِّ حَدَبٍ يَنْسِلُونَ ﴿١٦﴾

97. Waxaa Dhawaaday Yaboohii Xaqa Ahaa waxaana soo bixi inay taagnaan Indhaha kuwa Gaalobay (Iyagoo Dhihi) Halaaganagee waxaan kaga Sug-nayn Halmaansho kan Waxaanse ahayn Daalimiin.

وَأَقْرَبَ الْوَعْدِ الْحَقِّ فَإِذَا هِيَ شِخْصَةٌ
أَبْصُرُ الَّذِينَ كَفَرُوا يُنَوَّلُونَ قَدْ كُنَّا فِي
عَقْلٍ مِّنْ هَذَا بَلْ كُنَّا ظَالِمِينَ ﴿١٧﴾

Maryam Bintu Cimraanna wax badan yuu Quraanku ka warramay Sharafteedii iyo Sida Eebe u Dhawray ugana yeelay Iyada iyo Wiilkeedii Aayad iyo Calaamad Caalamka. Eebana waa Kali wuxuuna Mutaan in Isaga uun La Caabudo, Dadkiise way kala tageen oo Iskhilaafeen. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: annagu Nabiyada hadaan nahay Diintanadu waa mid (kaliya). Taasoo Macnaheedu yahay in waxyaabaha Waaweyn Diinuhu Iskaga mid Yihiin. Eebaase loo Noqon Cid walbana ka Abaal marin waxay kasbatay, cid la Halaagayna Adduunka uma Soo noqoto inta Dadka laga soo Bixin oo Qiyaame la Gaadhi oo ay ka soo Bixi yaajuuj iyo maajuuj oo Waqtigu ka Dhawaado, Markaasoo Kuwa Gaalobay ay Indha Taagi Iyagoo Sheegi Inay Halaagsameen Daalimiinna Ahaayeen Halmaanshana kaga Suggnaayeen Qiyaamada, waxse ma taro Calaacal Waqtigaas ee waxaa wax Tari Wanaaggii la Hormarsaday. Al-Anbiyaa' (91-97).

98. Idinka iyo waxaad Caabudaysaan oo Eebe ka Soo hadhay waxay Noqon Shidaalka Jahannamo idinkuna waad ku Arooraysaan.

إِنَّكُمْ وَمَا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ
حَصَبُ جَهَنَّمَ أَشَدُّ لَهَا وَرْدُونَ ﴿١٨﴾

99. Hadday Yihiin kuwaasu Ilaahyo kuma Arooreen, Dhamaanna way ku Waari.

لَوْ كَانَتْ هَتُولَاءَ آلِ اللَّهِ مَا وَرَدَهَا
وَكُلٌّ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿١٩﴾

100. waxay ku Yeelan Dhexdeeda Qay-

لَهُمْ فِيهَا زَفِيرٌ وَهُمْ فِيهَا لَا يَسْمَعُونَ ﴿٢٠﴾

lo, Waxna Dhexdeeda kuma Maq-laan.

101. kuway u Hor martay Xagganaga Wanaag kuwaasu Xaggeeda wa laga Fogayn.

إِنَّ الَّذِينَ سَبَقَتْ لَهُمْ مِنَّا الْحُسْنَىٰ أُولَٰئِكَ عَنْهَا مُعَذَّوٓتٌ ﴿١٥١﴾

102. mana Maqlaan Shanqadhteeda iyaguna waxay Doonto Naftoodu yey ku Waari.

لَا تَسْمَعُونَ حَسِيسَهَا وَهُمْ فِي مَا اشْتَهَتْ أَنفُسُهُمْ خَلَدُونَ ﴿١٥٢﴾

103. mana Walbahaariyo Argagaxii Waynaa, waxayna kula kulmi Malaa'igtu kani waa Maalintiinnii ah Tii laydiin Yaboohay.

لَا يَخْرُجُ عَنْهَا الْفَرَعُ الْأَكْبَرُ وَتَسْلَفُ فِيهَا الْأَمَلِيَّةُ هَذَا يَوْمُ الْمَوْءُودِ الَّذِي وَعَدْتُمْ ﴿١٥٣﴾

104. waana Maalintaan u Duubayno Samada Sida loo Duubo Warqadaha Kitaabka, Sidaan ku Billownay Abuuriddii hore Yaana ku soo Celinaynaa, waa Yabooh korkanaga ah, annagaana Falna saas.

يَوْمَ نَطْوِي السَّمَاءَ كَطَيِّ السِّجِلِ لِلْكُتُبِ ۗ كَمَا بَدَأْنَا أَوَّلَ خَلْقٍ نُعِيدُهُ وَعَدَّاعِلِيْنَا إِنَّا كُنَّا فَاعِلِينَ ﴿١٥٤﴾

105. Dhab ahaan waxaan ugu Qorray Zabuur Sheegid ka Dib (Looxul Maxfuudka) Dhulka waxaa Dhaxli Addoomadayda Suuban.

وَلَقَدْ كَتَبْنَا فِي الزَّبُورِ مِن بَعْدِ الذِّكْرِ أَنَّ الْأَرْضَ يَرْثُهَا عِبَادِيَ الصَّالِحُونَ ﴿١٥٥﴾

106. kan Gaadhsiin baa ugu Sugaan Ciddii caabudi (Eebe).

إِنَّ فِي هَذَا بَلَاءًا لِّقَوْمٍ عٰدِيٓنٍ ﴿١٥٦﴾

107. kumana aanaan Dirin Naxariista Caalamka adoo ah Mooyee.

وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِّلْعٰلَمِيٖنَ ﴿١٥٧﴾

Ciddii wax Eebe ka soo hadhay Caabudda iyo cidday Caabudeenba oo ka Raalli ah waxay noqon Shidaalka Nøarta, Ciddii Wanaag ugu hor maray Eebe waa laga Fogayn, mana maqlo shanqadheeda, wuxuu Doonana jannadu ka hela, mana ka Naxo Argaggaxa Qiyaamada, Malaa'igtaana u bishaarayn, waana Maalinta Cirka la Duubi, Dhulka Jannada iyo kan Adduunba waxaa u Hadhi Mu'miniinta Suuban, Quraankuna waa Gaadhsiin, Rasuulkuna waa naxariista Caalamka, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa yeclee) wuxuu yidhi: Layma Bixinin anoo wax Lacnada ee waxaa uun lay bixiyey Anoo Naxariis ah. (Muslim). Al-Anbiyaa' (98-107).

108. Waxaad Dhahdaa waxaa uun lay Waxyooday Aniga in Ilaahiinna in la caabudo mudan Ilaah kaliya yahay ee Idinku Muslimiin ma Tihiiin (Ma Ho-gaansameysaan).

قُلْ إِنَّمَا يُوحَىٰ إِلَيَّ أَنَّمَا إِلَهُمُ كُفْرًا إِلَٰهَ وَاحِدٍ ۗ فَهَلْ أُنشِرُ الْمُسْلِمُونَ ﴿١٥٨﴾

109. Haddayse Jeedsadaan waxaad Dhahdaa waxaan idin Ogaysiiyey si Siman (Cad) Colnimo Mana Ogi inay Dhawdahay ama Fogtahay waxa lay-diin Yaboohay.

فَإِنْ تَوَلَّوْا فَقُلْ ءَاذَنْتُكُمْ عَلَىٰ سَوَاءٍ وَإِنْ أُدْرِيَتْ
أَقْرَبُ أَمْ بَعِيدٌ مَّا تُوعَدُونَ ﴿١٠٩﴾

110. Eebe wuxuu Ogyahay waxa lala Qaylyo oo Hadala wuxuuna Oggyahay waxaad Qarinaysaan.

إِنَّهُ يَعْزَمُ الْجَهْرَمَاتِ الْقَوْلِ وَيَعْلَمُ مَا
تَكْتُمُونَ ﴿١١٠﴾

111. Mana Oggi waxay u Dhawdahay inay Fidmo idiintahay iyo Raaxo Tan iyo Muddo.


وَإِنْ أُدْرِي لَعَلَّهُ وَفِتْنَةٌ لَّكُمْ وَمَتَاعٌ
إِلَىٰ حِينٍ ﴿١١١﴾

112. Wuxuu yidhi (Nabigu) Eebow ku kala Xukun (Dhexdanada) Xaq, Eebahanana waa Raxmaan ee Looga Kaalmo waydiisto waxaad Sheegaysaan.

قَالَ رَبِّ احْكُم بِالْحَقِّ وَرَبُّنَا الرَّحْمَنُ
الْمُسْتَعَانُ عَلَىٰ مَا تَصِفُونَ ﴿١١٢﴾

Eebe waa Kali, Isagayna waajibtahay in Loo Hogaansamo, Cidiise Jeedsata ha Ogaato si Cad inay Eebe iyo Rasulkiisa la Colloowday, Kolleyna waa kii Gaalo la Cigaabo ama ha Dhawaato ama ha Dib Dhacdo Muddee, Eebana waa Ogyahay wax kasta ama Ha la Muujiyo ama Ha la Qarsadee, Dib u Dhigidda Cigaabtuna waxaa Suurowda inay tahay Imtixaam iyo u Raaxayn Muddo.

Eeban isagaa ah Xaakimka Caadilka ah, Sharcigiisaana Caadil ah, Isagaana looga Kaalmo waydiistaa Dhibaataada iyo waxay Gaaladu Sheegi oo Xumaan ah. Nabigga iyo Nabiyadii kalaba Nabadgagalayo Eebe korkooda ha yeelee waxay Dhihi jireen Eebow Cadaalo nagu kala Xukun Anaga iyo Qoomkanaga. Al-Anbiyaa' (108-112).'



Suurat Al-Xajj

سُورَةُ الْحَجِّ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Dadaw ka Dahawrsada Eebihii Maxaayeelay Gilgilashada Saacadda (Qiyaame) waa wax wayn (Daran).

2. waana Maalintaad Arkaysaan Iya-dooy Halmaami Mid wax Nuujisa Dhammaanteed waxay Nuujinaysay, ooy Dejin (Tuuri) mid Kastoo Uur leh Uurkeeda, waxaadna Arkaysaa Dad koo Waalan, mana aha kuwo (dhab) u Waalan ee Cadaabka Eebaa Daran.

3. Dadka waxaa ka mid ah Ruux ku Murmi Eebe Cilmi la'aan oo raaci Shaydaan kastoo Madax Adag.

4. Waxa loo Qoray (Shaydaan) Ruuxii Talada u Dhiibta (Raaca) inuu Baa-diyeeyo kuna Toosiyo Cadaabka.

Suuraddan waxaa lagu Magacaabaa Suuradda Xajka, Maxaayeelay waxay ka Warrantay Xajka iyo waxa la Xidhiidha, waxayna ku Billaabatay Shiddada Qiyaamada iyo inay Dadku ka Dhawrsadaan Dhibaataadaas, waxaana looga Dhawrsan Camal Fiican, Dadkuna Maalintaas waxay la Kulmi Arrin wayn inta laga Moodo inay Waalanyihiin iyagoon Waallayn ee waa uun Dhibka, wixii Ilma ah oo la nuujin hayey ama Uurka ku jirayna la Tuuro, Tan kale ma Haboona in Cilmi Darro lagu Doodo Eebe iyo Diinta, lana Raaco Shaydaan wax Dhumiya, Naartana u Hogaamiya.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Waxaa laydin Soo kulmin Qiyaamada idinkoo Kaba La'oo Qaawan, oon Gudnayn, Caa'isha waxay Tidhi: Rasuulka Eebow Ragga iyo Haweenku mays Dhawri! Markaasuu Yidhi Nabigu: Caa'ishoy Xaalku waa ka Daranyahay in waxaasi Shuqiiyo. Taasina waxay ku Tusin Dhibaataada Qiyaamada. Al-Xajj (1-4).

5. Dadow haddaad Tihii kuwo Shakisaa soo Bixinta Annagaa idinka Abuuray Carro, Haddana Dhibic Haddana Calaqa, Haddana Goosin la Abuuray iyo Midaan la Abuurin si aan idiinku

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّ كَمَا أَنَّ زَلْزَلَةَ السَّاعَةِ شَيْءٌ عَظِيمٌ ﴿١﴾

يَوْمَ تَرَوْهَا نَذْهَلُ كُلَّ مُرْضِعَةٍ عَمَّا أَرْضَعَتْ وَتَضَعُ كُلُّ ذَاتِ حَمْلٍ حَمْلَهَا وَتَرَى النَّاسَ سُكَرَىٰ وَمَا هُمْ بِسُكَرَىٰ وَلَٰكِنَّ عَذَابَ اللَّهِ شَدِيدٌ ﴿٢﴾

وَمِنَ النَّاسِ مَن يَجْعَلُ فِي اللَّهِ مَغْفِرَةً لِّعَمَلِهِ وَيَتَّبِعْ كُلَّ شَيْطَانٍ مَّرِيدٍ ﴿٣﴾

كَتَبَ عَلَيْهِ أَنَّهُ مَن تَوَلَّاهُ فَإِنَّهُ يُضِلُّهُ وَيَهْدِيهِ إِلَىٰ عَذَابِ السَّعِيرِ ﴿٤﴾

يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِن كُنْتُمْ فِي رَيْبٍ مِّنَ الْبَعْثِ فَإِنَّا خَلَقْنَاكُمْ مِّن نُّرَابٍ ثُمَّ مِنْ نُطْفَةٍ ثُمَّ مِنْ عَلَقَةٍ ثُمَّ مِنْ مُّضْغَةٍ مُّخَلَّقَةٍ وَعَجْرٍ

Caddayno (Qudrada Eebe) waxaana ku sugnaa Makaanka waxaan Doonno Tan iyo Muddo Magacaaban, markaasaan idin soo Bixinaynaa Idinkoo Yar, markaas inaad Gaadhaan Xooggiinna: waxaa idinka mid ah Cid la oofsan (Dhiman) waxaana idinka mid ah kuwo loo celin Cimri Liita (Gabow) si ayna u Garanin intay wax Yaqiineen ka dib waxba, waxaad Arkaysaa Dhulkoo Abaar (Dhimaad) ah markaan ku soo Dejinno Korkeeda Biyana way Gilgilaataa wayna Kortaa, waxayna soo Bixisaa Nooc kastoo Quruxsan.

6. Taasna waxaa ugu Wacan in Eebe uun Xaq yahay uuna Nooleeyo waxa Dhintay iyo inuu wax walba Karo.

7. Iyo in Saacadda Qiyaame iman Shaki la'aan, Eebana wuxuu soo Bixin waxa Qubuuraha ku Sagan.

Dadka Kuma haboona inay diidaan soo Bixinta Maxaayecay waxay soo mareen Abuurid kala Duwan Laga bilaabo Dhibic Ilaa intay ka Gaboobaan, Arrintaasuna ugu filan Waano, waxaa kaloo Waano ugu Filan Roobka iyo Dooguu soo Bixiyo Abaar ka Dib, Taasina waxay Sugi Awoodda Eebe iyo Xaqnimadiisa iyo in Qiyaamadu Imaan Shaki la'aan iyo Eebe inuu soo Bixin waxa Dhintay. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Abuuridda Midkiin waxaa lagu Kulmiyaa Uurka Hooyadii Afartan Dhibic, markaas Xinjir in la Mid ah, haddana Goosin Sidoo kale, markaas Malag loo Bixiyaa waxaana la faraa Afar Kalimo waxaana la Qoraa Rizqigiisa, Camalkiisa, Ajashiisa Xumaan iyo Liibaan, markaasaa lagu Afuufaa Ruuxda. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

Taasina waxay ku Tusin in Dadaal Fiican la dadaalo iyadoo la Ogyahay in Eebe wax walba Qaddaray. Al-Xajj (5-7).

8. Dadka waxaa ka mid ah mid ku Doodi Eebe Cilmi La'aan iyo Hanuun La'aan iyo Kitaab wax Nuurin la'aan tiis.

9. Oo Dadbi Luqunta (Iskibrin) inuu ka Dhumiyo Jidka Eebe, wuxuu Mudan Adduunyada Dulli waxaana Dhadhan-siin Maalinta Qiyaame Cadaab wax Guba.

مُخَلَّفَةٌ لِّبَنِينَ لَكُمْ وَقُرْفَى الْأَرْضِ
مَا نَشَاءُ إِلَىٰ أَحْسَنِ مَسْمًى ثُمَّ نُخْرِجُكُمْ طِفْلًا
ثُمَّ لِيَتَّبِعُوا أَسْدَكُمْ وَمِنْكُمْ مَنْ يَتُوفَىٰ
وَمِنْكُمْ مَنْ يُرَدُّ إِلَىٰ أَرْذَلِ الْعُمُرِ لِكَيْ لَا
يَعْلَمَ مِنْ بَعْدِ عِلْمٍ شَيْئًا وَتَرَىٰ الْأَرْضَ
هَامِدَةً فَاذًا أَنْزَلْنَا عَلَيْهَا الْمَاءَ اهْتَزَّتْ وَرَبَّتْ
وَأُنبِتَتْ مِنْ كُلِّ رَوْحٍ وَيُحْيِي ۝

ذَلِكَ بِأَنَّ اللَّهَ هُوَ الْحَقُّ وَأَنَّهُ يُحْيِي الْمَوْتَىٰ وَأَنَّهُ عَلَىٰ
كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ۝

وَأَنَّ السَّاعَةَ آتِيَةٌ لَا رَيْبَ فِيهَا وَأَنَّ اللَّهَ يَبْعَثُ مَنْ فِي
الْقُبُورِ ۝

وَمِنَ النَّاسِ مَن يُجَادِلُ فِي اللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَلَا هُدًى
وَلَا كِتَابٍ مُّنبِئٍ ۝

ثَلَاثِي عَظْفِهِ لِيُضِلَّ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ لَهُ فِي الدُّنْيَا
خِزْيٌ ۖ وَنُذِيقُهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ عَذَابَ الْحَرِيقِ ۝

10. Taasna waa waxay Hor marsatay Gacmahaagu, Eebana ma aha Dulmiyaha Addoomada.

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمْت يَدَاكَ وَأَنَّ اللَّهَ لَيْسَ بِظَلَمِيرٍ
لِّلْعَمِيدِ ﴿١٠﴾

11. Waxaa ka mid ah Dadka mid u Caabudi (Eebe) Dhinac (Shaki) Had-duu soo Gaadho Khayra Xasili, Had-duusoo Gaadho Imtixaan (Dhibna) u Gadooma Wajigiisa (Gaalooaba) wuxuu Khasariyey Adduun iyo Aakhiraba Kaasina waa Khasaaraha Cad uun.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يَعْبُدُ اللَّهَ عَلَىٰ حَرْفٍ فَإِنْ أَصَابَهُ
خَيْرٌ أَطْمَأَنَّ بِهِ وَإِنْ أَصَابَتْهُ فِتْنَةٌ انْقَلَبَ عَنَّا
وَجْهَهُ خَسِيرًا ۗ الدُّنْيَا وَالْآخِرَةُ ۗ ذَٰلِكَ هُوَ الْخُسْرَانُ
الْمُبِينُ ﴿١١﴾

12. Wuxuu Caabudi (Baryina) Eebe ka Sokow waxaan Dhibayn Anfacyayna Kaasina waa uun Baadida Fog.

يَدْعُوا مِن دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُ وَمَا لَا نَفْعَ لَهُ
ذَٰلِكَ هُوَ الضَّلَالُ الْبَعِيدُ ﴿١٢﴾

13. Wuxuu Caabudi wax Dhibkiisu ka Dhawyahay Nacfigiisu, isagaa u Xun Sokeeye una Xun la noolaadi.

يَدْعُوا لَمَن ضَرُّهُ أَقْرَبُ مِن نَّفْعِهِ لَيْسَ
الْمَوْلَىٰ وَلَيْسَ الْعَشِيرُ ﴿١٣﴾

Waxaa ka mid ah Dadka kuwo ku Murmi Ilaahay Cilmi iyo Hanuun iyo Kitaab Cad La'aantiis, ee Kibir iyo Isla weyni uun la Jooga, inay Dadka Xaqa ka Leexiyaan, kuwaasuna waxay mudan Dulli Adduun iyo cadaab Aakhiro, lamana Dulmiyin ee waa waxay hor marsatay Gacantiisu, waxaa kaloo ka mid ah kuwa Eebe u Caabudi dhinac oo Haddu Khayr Helana Xasila, Haddii Dhib ku Yimaadana Gaalooaba, Kaasina waa mid iska Khasariyey Adduun iyo Aakhiraba, waana Khasaaraha Dhabta aha, wuxuuna Caabudi Eebe ka Sokow waxaan waxba Tarayn, dhibkiisuna ka Dhawyahay Nacfigiisa, kaasaana u Xun Sokeeye iyo Cashiir. Ibnu Cabbaas wuxuu Sheegay in Baadiyihii Carbeed markay Khayr Helaanna Dhihi Jireen waa Diin Fiican marka Dhib ku Yimaadana Dhihi Jireen waa Diin Xun Markaasaa Eebe soo Dejiyey Aayadahan, Diintuna waa uun Xaq, ama Barwaaqo ha timaaddo ama Dhib ha yimaadee. Al-Xajj (8-13).

14. Ilaahay wuxuu Galiyaa kuwa Ru-meeyey (Xaqa) oo Falay Camal Fiican Jannooyin ay Socoto Dhexdeeda Wabiyaal, Eebana wuxuu Falaa wuxuu Doono.

إِنَّ اللَّهَ يُدْخِلُ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ
جَنَّاتٍ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ۗ إِنَّ اللَّهَ يَفْعَلُ مَا
يُرِيدُ ﴿١٤﴾

15. Ciddii u Malayn Inuusan u Gargaarayn Eebe Nabigiisa Adduun iyo Aakhiraba ha u Fidiyo Xadhig Xagga Samada hana isku Gooyo (Marjiyo) hana dayo inay Dhagartiisu Tegsiiso waxa Cadho Galin.

مَن كَانَ يَظُنُّ أَن لَّن يَضُرَّهُ اللَّهُ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ
فَلْيَمْدُدْ بِسَبَبٍ إِلَى السَّمَاءِ ۚ فُذٌّ يَاقُطَعُ فَلْيَنْظُرْ هَلْ
يُدْهِبُنَّ كَيْدَهُ مَا يَغِطُّ ﴿١٥﴾

16. Saasaana kuugu soo Dejinay Aayaad Cad Eebana wuxuu Hanuuniyaa Cidduu Doono.

وَكَذَٰلِكَ أَنْزَلْنَاهُ آيَاتٍ يَتَذَكَّرُ ۗ وَأَنَّ اللَّهَ يَهْدِي
مَن يُرِيدُ ﴿١٦﴾

17. Kuwa Rumeeyey (Xaqa) iyo Kuwa Yuhuudoobay iyo Saabi'inta (Xiddigaha Caabuda) iyo Nasaarada iyo Majuusiga iyo Mushrikiinta Eebaa kala bixin Dhexdooda Maalinta Qiyaame, Eebana Wax kasta wuu Arkaa.

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَالَّذِينَ هَادُوا وَالصَّٰدِقِينَ
وَالصَّٰدِقَاتِ وَالْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ أَشْرَكُوا إِنَّ
اللَّهَ يَفْصَلُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ الْقِيٰمَةِ إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ
شَيْءٍ وَشَهِيدٌ ﴿١٧﴾

18. Miyaadan Arkayn inay Eebe u Sujuudaan waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, iyo Qorraxda iyo Dayaxa iyo Xidigaha iyo Buuraha iyo Geedaha iyo Xayawaanka iyo Waxbadan oo Dadka ah, wax badanna waxaa ku sugnaaday Korkooda Cadaab, Ruuxuu Ihaaneeyo Eebana Ma laha wax Sharifi, Eebana wuxuu Falaa wuxuu Doono.

الَّذِينَ تَرَأَتْ اللَّهَ لَيْسَجْدَلَهُ مِنْ فِي السَّمٰوٰتِ وَمَنْ فِي
الْاَرْضِ وَالشَّمْسُ وَالْقَمَرُ وَالنُّجُومُ
وَالْجِبَالُ وَالشَّجَرُ وَالْاَنْبِيَاُ وَكثيرٌ مِّنَ النَّاسِ
وَكثيرٌ مِّنَ عَالِيَةِ الْعَذَابِ وَمَنْ يُهِنِ اللَّهُ فَمَا لَهُ
مِنْ مُّكْرِمٍ اِنَّ اللَّهَ يَفْعَلُ مَا يَشَآءُ ﴿١٨﴾

Ciddii Wanaag fasha waxaa lagu Abaal marin Wanaag, Ciddiise u malayn Nabiga inaan Eebe u Gargaarayn Adduun iyo Aakhiraba hadduu Doono Cadho ha u Dhinto Bal inay wax u tarto, Eebana Quraan Cad yuu soo Dejiyey, Eebaana Hanuuniya Cidduu Doono, Dhammaanna Muslim iyo Gaalo Eebaa kala Bixin Qiyaamada, wax kastana Ilaahay Buu u Sujuudaa, oo u Khushuucaa una Hogaansamaa, Sujuudduna ma aha Tan Dadkoo kale ee wax kasta wuxuu u sujuudaa si ku Habboon, waxaana Sugnaatay in Shaydaanku Qoomamayn markuu Galo Naarta, Mu'miniintuna Jannada oo Sheegi inuu Khasaaray markuu Diiday Sujuudda. waxayna ku Tusin in Ciddii Sujuudi wayda ay Raacday Sheydaan kana Leexatay Jidka Toosan. Al-Xajj (14-18).

19. Labadani waa Doodayaal, waxayna ku Doodeen Eebahood, kuwa Gaaloo-bay waxaa loo Goyn Maryo Naar ah waxaana Lagu Shubi Korkooda Biyo Kulul.

* هٰذَا نِ حَصَمٰنِ اَخْتَصَمُوْا فِي رِيْهِمْ فَاَلْدِيْنَ
كَفَرُوْا وَقَطَعَتْ لَهُمْ نِيَابٌ مِّنْ نَّارٍ نَّصَبَ مِنْ
فَوْقِ رُءُوسِهِمْ لَحِيْمٌ ﴿١٩﴾

20. waxana lagu Gubaa (Lagu Dhalaaliyaa) waxa Caloosha ku Jira iyo Jidhka (Haraga).

يُصْهَرُ بِهِ مَآءٌ مِّنْ بُطُوْنِهِمْ وَالْجُودُ ﴿٢٠﴾

21. waxay Mudan Budhadh Bir ah.

وَلَهُمْ مَّقٰمِعٌ مِّنْ حٰدِيْدٍ ﴿٢١﴾

22. Markastooy Doonaan inay ka Baxaan Xaggeeda Walbahaar Dartiis waa lagu Celiyaa Dhexdeeda (waxaana la Dhahaa) Dhadhamiya Cadaabka Gubidda.

كَلِمًا اَرَادُوْا اَنْ يَخْرُجُوْا مِنْهَا مِنْ عَمْرِ اُعِيْدُوْا
فِيْهَا وَدُوْقُوْا عَذَابَ الْحَرِيْقِ ﴿٢٢﴾

23. Eebana wuxuu Galiyaa kuwa Ru-

اِنَّ اللَّهَ يَدْخُلُ الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا وَعَمِلُوْا الصَّٰلِحٰتِ

meeyey (Xaqa) oo Fala Camal Fiican Jannooyin ay Dureeri Dhexdeeda Wabiyaal, waxaana Loogu Xidhaa Dhexdeeda Jinjimo Dahab ah iyo Jawhar, Dharkooduna Dhexdeeda waa Xariir.

جَبَّتْ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ يُحَلَّوتُ فِيهَا مِنْ أَسَاوِرَ مِنْ ذَهَبٍ وَلُؤْلُؤًا وَلِبَاسُهُنَّ فِيهَا حَرِيرٌ ﴿٢٢﴾

24. waxaana lagu Hanuuniyey Wanaaga Hadalka waxaana lagu Hanuuniyey Jidka la Mahdiyo.

وَهُدُوا إِلَى الظِّلِّ مِنَ الْقَوْلِ وَهُدُوا إِلَى صِرَاطِ الْحَمِيدِ ﴿٢٤﴾

25. kuwa Gaaloobay oo ka Celiya Jidka Eebe iyo Masaajidka Xurmaysan ee looga Yeelay Dadka Sinnaan mid ku Nagi iyo mid Meel ka yimidba ciddii la Doonata Dhexdiisa Leexin Dulmi ah (Xumaan) waxaannu Dhadhansiin Cadaab Daran.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَيَصُدُّونَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ وَالْمَسْجِدِ الْحَرَامِ الَّذِي جَعَلْنَاهُ لِلنَّاسِ سَوَاءً الْعَكِفُ فِيهِ وَالْبَاءِ وَمَنْ يُرِدْ فِيهِ بِإِلْحَادٍ يُظْلَمِ نَدْفَهُ مِنْ عَذَابِ أَلِيمٍ ﴿٢٥﴾

Kuwa Xaqa ku socda iyo kuwa Gaalaada ah waa labo Kooxood oo ku Doodi Eebe, markaasaa Eebe Gaalana si darran u Ciqaabi, Mu'iniintana Janno iyo Wanaag ku Abaal marin, maxaayelay Wanaagbaa Eebe ku toosiyey, Ciddiise Gaalowda oo ka Celisa Dadka Jidka Eebe iyo Masaajidka Xurmaysan ee Eebe u Simay Mu'iniinta Ciddii wax Qallooca iyo Dulmi kula Timaadda Dhexdiisa wuxuu ku Abaal marin Cadaab Daran.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Dulmigaas waa inaad ku Bannaysataa Xaramka wax lagaa Reebay oo Xumaan ah ama Dil Xaq Darro. Ciddii Saas Fashana waxay Mudan Cadaab Daran. Al-Xajj (19-25).

26. (Xusuuso) markaan u Muujinay Nabi Ibraahim Meesha Baytka (Kacbad) Annagoo ku Dhihi Ha la Wadaajin Eebe (Cibaadada) waxba, u Daahirina Gurigayga kuwa Dhawaafi iyo kuwa Taagan iyo kuw ku Rukuucsan ee Sujuudsan.

وَإِذْ بَوَّأْنَا لِإِبْرَاهِيمَ مَكَانَ الْبَيْتِ أَنْ لَا تُشْرِكْ بِي شَيْئًا وَطَهِّرْ بَيْتِيَ لِلطَّائِفِينَ وَالْقَائِمِينَ وَالرُّكَّعِ السُّجُودِ ﴿٢٦﴾

27. Ogaysiina Dadka Xajka ha kuu Yimaaddeen iyagoo Lugayn (qaarna) saaran yahay mid Bog Dheer Dhammaanteed oo ka iman Jaha kasta oo Dheer.

وَإِذْ نَفَخْنَا فِي نُفُسِكُمْ الرُّوحَ مِنْ رَبِّكَ وَإِذْ يَخْلُقُ الْإِنْسَانَ مِنْ عَلَقٍ وَإِذْ يَأْمُرُ بِآيَاتِهِ مِنْ كُلِّ مَجْزٍ عَمِيQٍ ﴿٢٧﴾

28. inay Jogaan (uu yimaadaan) Nacfi-gooda Dartiis, oy xusaan Magaca Eebe Maalmo la Yaqaan, waxa Eebe ku Arzaaqay oo ah Xayawaanka nicmoolayda, ka Cuna Xaggeeda Quudiyaan kan Dhibaataysan ee Faqiirka ah.

لِيَشْهَدُوا مَنَافِعَ لَهُمْ وَيَذْكُرُوا أَنَّمَا أَلَمَّهُ فِي آيَاتِهِ فَعَلُوا مِنْهَا وَأَطَاعُوا الْبَآئِسَ الْفَقِيرَ ﴿٢٨﴾

29. markaas ha Dhammeeyeen basaa-
tooda, hana Oofiyeen nadorkooda,
hana Dawaafeen Baydka Horyeeyey.

ثُمَّ لِيَقْضُوا تَفَثَهُمْ وَلِيُتُوفُوا نُذُرَهُمْ
وَلِيُطَوَّفُوا بِالْبَيْتِ الْعَتِيقِ ﴿٢٩﴾

waxaa Eebe Tusiyeey Nabi Ibraahim Kacbada uuuna Dhisay isagoo Faray inuu Gaalimada ka nadiifiyo, dadkana Xajka ugu yeedho, si ay meel kasta uga yimaadaan, una Helaan Nacfi Adduun iyo mid Aakhiraba, una Xusaan Eebe, Hadiyo Xoola ahna ugu Gawraacan waxna ka Cunaan kana Quudiyaan Masaakiinta iyo kuwa Dibaataaysan, Basaastana iska Bi'iyaan Oofiyaanna nadarka, Dawaafaanna Baydka horreeyey. Saasaad u Aragtaa in si Daran loo Yimaaddo Maka Xaj iyo Cumro, loogana helaan Wanaag iyo Khayr Adduun iyo Aakhiraba, waana Masaajid Sharaf leh oy Kacbada ku Taal oy Waajibna tahay in la Weyneeyo, waxaana sugnaatay in Nabigu (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) La warsaday Masaajidkee u Horreyey Uuna Yidhi (Masaajidka Xurmaysan) lana yidhi Yaa ku Xigay Yidhina (Baytul maqdis) imisaa u Dhaxaysay markii la Yidhina uu Yidhi Afartan Sano. Kacbada waa Tan ula Jeedsadaan Muslimiintu Salaadda kuna Tusin Midnimada iyo Sinaanta iyo Isu naxariisashada, waana Sharafta Islaamka iyo Muuqiisa. Al-Xajj (26-29).

30. Waa Saas, Ruuxii Wayneeya wuxuu
Reebay Eebe Saasaa u Khayrroon
Eebihis Agtiisa, waxaana laydiin ban-
neeyey Nicmoolayda waxa Laydinku
akhriyo Mooyee, ee ka Dheeraada
Xumaanta ah Sanamyada kana Dhee-
raada Hadalka Beenta ah.

ذَٰلِكَ وَمَنْ يُعْظَمِ حُرْمَتَ اللَّهِ فَهُوَ حَذِيرٌ
لَّهُ، عِنْدَ رَبِّهِ، وَأُجِّلْتَ لَكُمْ الْأَنْعَامَ إِلَّا
مَا بَشَىٰ عَلَيْكُمْ فَاجْتَنِبُوا الرِّجْسَ مِنَ
الْأَوْثَانِ وَاجْتَنِبُوا قَوْلَ الزُّورِ ﴿٣٠﴾

31. Idinkoo u Toosan Eebe oon Mush-
rikiin ahayn, Ruuxii u Shariig yeela
Eebe wuxuu la mid yahay mid ka Soo
Dhacay Samada oy Dafi Shimbirtu ama
ay ku Tuuri Dabayshu Meel Dheer oo
halaag ah.

حَقَّاءَ لِلَّهِ عِزِّ مُشْرِكِينَ بِهِ، وَمَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ
فَكَأَنَّمَا خَرَّ مِنَ السَّمَاءِ فَتَخْطَفُهُ الطَّيْرُ أَوْ تَهْوِي بِهِ
الرَّيحُ فِي مَكَانٍ سَجِيقٍ ﴿٣١﴾

32. waa Saas Ruuxii wayneeya Amara-
da Eebe (Sharciigiisa) taasi waa dhawr-
sashada Quluubta.

ذَٰلِكَ وَمَنْ يُعْظَمِ شَعَائِرَ اللَّهِ فَإِنَّهَا مِن تَقْوَى
الْقُلُوبِ ﴿٣٢﴾

33. Waxaa idiinku Sugnaaday (hadiya-
da) Nacfi Tan iyo Muddo, Markaas
waxay ku Dhammaan Baydka Hor-
reeyey.

لَكُمْ فِيهَا مَسْتَفْعٌ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى يُرِيحُهَا إِلَى
الْبَيْتِ الْعَتِيقِ ﴿٣٣﴾

34. Ummad kasta waxaan u yeellay
Cibaado (Ciid) inay ku Xusaan Eebe
wuxuu ku Arzaaqay oo Xayawaanka
Nicmoolayda ah, Ilaahiinna waa Ilaah
kaliya ee u Hogaansama una Bishaaree
kuwa Xasilloon (ee Cabsada) ee ah.

وَلِكُلِّ أُمَّةٍ جَعَلْنَا مَنْسَكًا لَّذِكْرُوا اسْمَ اللَّهِ
عَلَىٰ مَا رَزَقَهُمْ مِنْ نَيْمِيمَةٍ ۚ وَالْأَنْعَامَ فَإِلَهُكُمْ إِلَهُ
وَاحِدٌ فَلَهُ أَسْمَاؤُا وَيُنَادُّ الْمُحْشِينَ ﴿٣٤﴾

35. Kuwa marka la Xuso Eebe ay Cabsato Quluubtoodu, kuna Samra waxa ku Dhaca ee Ooga Salaada, waxaan ku Arzaaqnayna wax ka Bixiya.

الَّذِينَ إِذَا دُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَالصَّابِرِينَ
عَلَىٰ مَا أَصَابَهُمُ وَالْمُقِيمِي الصَّلَاةِ وَمِمَّا
رَزَقْنَاهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣٥﴾

Saan soo Sheegnay Suuraddan waxay ka warrami Camalka Xajka, halkanna wuxuu Eebe Fari in la Dhawro Sharcigiisa, lagana Dheeraado Gaalnimada iyo Beenta, Illeen Ciddii Eebe wax la Caabudda waa midday ku Dhacday khasaare waxayna kale oy ka warrami Aayaduhu Hadyada la Gawrici Xajka iyo Habkeeda iyo in Eebe kaliya la Caabudo Loona Hogaansamo Sharcigiisa, kuwaas saas Falana waa kuwa Qalbigoodu Cabsado oo Samra, oo Salaadda Ooga, Zakadana Bixiya, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Maraga Beenta ah wuxuu la Sinnaaday Eebe wax lala Caabudo, wuxuuna Akhriyey Aayadda. Taasina waxay ku tusin Xumaanta Beenta iyo inay Khatartahay intay kala mid Noqotay Gaalimada. Al-Xajj (30-35).

36. Loogga (Hadyada) waxaan idiinka Yeellay Sharciga Calaamooyinka Eebe waxaana idiinku Sugaan Dhexdeeda Khayr ee ku Xusa Magaca Eebe Korkeeda iyadoo Jilib Xidhan, markay U dhacdo Dhinacna wax ka Cuna, kana Quudiya kan Dhawrsoon iyo kan Warsanba, Saasaana idiinku Fududaynaa, inaad Mahdisaan.

وَالَّذِينَ جَعَلْنَا لِكُلِّ مِّنْ شَعَائِرِ اللَّهِ لِكُفُوبِهَا
خَيْرًا فَاذْكُرُوا أَسْمَاءَ اللَّهِ عَلَيْهَا صَوَافٍ ۗ وَإِذَا وَجَبَتْ
جُنُوبُهَا فَكُلُوا مِنَّمَا وَأَطِعُوا الْقَارِعَ ۗ وَالْمَعْتَرُ كَذَلِكَ
سَخَّرْنَاهَا لَكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٣٦﴾

37. Ma gaadho Eebe Hilibkeedu iyo Dhiiggeedu waxaase Gaadha ka Dhawrsoonidiinna, Saasaana Eebe idiinku Fududeeyaa inaad ku Waynaysaan wuxuu idinku Hanuuniyey una Bishaaree kuwa Wanaagga Fala.

لَنْ يَبَالَ اللَّهُ لِحُومِهَا وَلَا دِمَائِهَا وَلَكِنْ يَبَالَ
الَّتِيقُوْا مِنْكُمْ كَذَلِكَ سَخَّرَهَا لَكُمْ لِتُكَبِّرُوا اللَّهَ
عَلَىٰ مَا هَدَيْكُمْ ۗ وَبَشِّرِ الْمُحْسِنِينَ ﴿٣٧﴾

38. Eebana wuu Daafacaa kuwa Rumeeyey (Xaqa) Eebana ma Jecla mid kastoo Khayaamo Badan oo Gaalimo Badan.

۞ إِنَّ اللَّهَ يَدْفَعُ عَنِ الَّذِينَ ءَامَنُوا أَنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ
كُلَّ فَخْوَانٍ كَفُورٍ ﴿٣٨﴾

39. Waxaa loo Idmay kuwa lala Dagaallami (inay Dagaallamaan) maxaayeelay waa Dulmiyey Eebena Gargaarkooda wuu Karaa.

إِنَّ الَّذِينَ يَفْتَنُونَ إِلَىٰ نَفْسِهِمْ طُغْيَانًا ۗ إِنَّ اللَّهَ
عَلَىٰ نَصْرِهِمْ لَقَدِيرٌ ﴿٣٩﴾

40. waana kuwa laga Bixiyey Guryahoodii xaq Darro iyo Inay Dheheen Eebahanno waa Ilaahay, haddayna Jirin ku Daaficidda Eebe Dadka Qaar-

الَّذِينَ أُخْرِجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ بِغَيْرِ حَقٍّ ۗ إِنَّ لَنَا
يَقُولُوا رَبَّنَا اللَّهُ وَلَوْلَا دَفَعَهُ اللَّهُ النَّاسَ بَعْضَهُمْ

kood Qaar waxaa la Dumin lahaa Macaabidda Yuhuud, iyo Biyac Kaniisadaha, iyo Kaniisadda Dad kale, iyo Masaajidda lagu Xuso Dhexdeeda magaca Eebe wax badan, wuuna u Gargaari Eebe Cidii u Gargaarta (Diintiisa) Eebana waa Xoog Badane Adkaada.

بَعْضٌ لَهَدِمَتْ صَوَامِعُ وَبِيعَ وَصَلَوَاتٌ
وَمَسْجِدٌ يُذَكِّرُ فِيهَا أَسْمَاءَ كَثِيرًا
وَلَيَضُرَّنَّ اللَّهُ مَنْ يَصْرِفُهُ وَإِنَّ اللَّهَ لَظَوِيرٌ
عَزِيزٌ ﴿١٧﴾

Xoolaha Eebaa Noogu Nicmeeyey, Cunno, Cabbid, Rarasho, Korid iyo waxyaalo kale, Hadyana Xajkaa loogu Qalaa waxaana wax laga siiyaa kuwa Baahan, Ilaahayna Dan Kama leh Hilibkeeda iyo Dhiigeeda ee Wuxuu ka Abaalmaryaa Wanaagga, Eebaana Daafaca Mu'miniinta Dhabta ah Loona Idmay inay Dagaallamaan, Illeen waa la dulmiyey oo Xaq Darro looga soo Bixiyey Guryahoodiye, Haddaan Eebe Mu'miniinta ku Daaficin Gaaladana waxaa la Dumin lahaa Meclaha lagu Caabudo Eebe. Al-Xajj (36-40).

41. waana kuwa Haddaan Makanino Dhulka Ooga Salaadda oo Bixiya Zakada oo Fara Wanaagga oo ka Reeba Xumaanta, Eebaana iskale Cidhibta Arrimaha.

الَّذِينَ إِن مَكَانَهُمْ فِي الْأَرْضِ أَقَامُوا الصَّلَاةَ
وَأَتَوْا الزَّكَاةَ وَأَمَرُوا بِالْمَعْرُوفِ وَنَهَوْا عَنِ
الْمُنْكَرِ وَاللَّهُ عَاقِبَةُ الْأُمُورِ ﴿١٨﴾

42. Hadday ku Beeniyaan waxaa Beeniyey Hortood Qoomkii (Nabi) Nuux iyo Caad iyo Thamuud.

وَإِن يُكَذِّبُوكَ فَقَدْ كَذَّبَتْ قَبْلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ
وَعَادٌ وَثَمُودٌ ﴿١٩﴾

43. iyo Qoomkii (Nabi) Ibraahim iyo Qoomkii (Nabi) Luudh.

وَقَوْمُ إِبْرَاهِيمَ وَقَوْمُ لُوطٍ ﴿٢٠﴾

44. iyo Ehelkii Madyan, waana la Beeniyey (Nabi) Muuse, waana Sugay Gaalada markaasaan Qabtay ee see noqday Cigaabkii.

وَأَصْحَابُ مَدْيَنَ وَكَذَّبَ مُوسَىٰ فَأَمَلَيْتُ لِلْكَافِرِينَ
ثُمَّ أَخَذْتُهُمْ فَكَيْفَ كَانَتْ نَجِيرٌ ﴿٢١﴾

45. maxay Badantahay Magaalo aan Halaagnay iyadoo Gardaran iyaduna u Dhacday Darbiyadeedii iyo Ceel la Halleeyey iyo Daar wayn (markii la Halaagay Dadkii).

فَكَانَ مِنَ قَرْيَةٍ أَهْلَكْنَاهَا وَهِيَ ظَالِمَةٌ
فَهِيَ حَاوِيَةٌ عَلَىٰ عُرُوشِهَا وَيَمُرُّ مَعْطَلُهُ وَفَصَّرَ
مَشِيدٌ ﴿٢٢﴾

46. miyeyna ku Soconin Dhulka oy u Ahaato Quluub ay wax ku Kasaan ama Dhago oy wax ku Maqlaan, Indha Beelka Dhabta ahna waa Indho Beelka Quluubta ku Sugaan Laabta.

أَقْلَرَسِيرٌ وَأَفِي الْأَرْضِ فَتَكُونُ لَهُمْ قُلُوبٌ يَعْقِلُونَ
بِهَا أَوْ أَدَانٌ يُسْمَعُونَ بِهَا فَأَيُّهَا لَا تَعْمَى
الْأَبْصَارُ وَلَكِن تَعْمَى الْقُلُوبُ الَّتِي فِي الصُّدُورِ ﴿٢٣﴾

Kuwa Eebe u Yaboohay una Gargaaro waa kuwa Niyeysan Hadduu Eebe makaniyo dhulka ku Maamuli Diinta Eebe iyo Sharcigiisa, oo Dhawri Salaadda, Zakada Wanaag Faridda, Xumaan ka Reebidda, iyo Khayroo Dhan. Kuwaan Saas ahaynse siday ku Mudan Gargaar Eebe, Cidiise Beenisa Nabiga iyo Xaqa, waxay la mid Noqon kuwii hore ee Beeniyey lana Ciqaabay, Imisaana la Halaagay Magaalo Kibirtay oy Guryihii, Ceelashii iyo Meel kastaba Cidlowday, wayna Arki Kartaa Ciddii marta Dhulka. Indha la'aanta Dhabta ahna waa Tan Qalbiga mar Haddaan Xaqa, Hanuunka iyo Nuurka Eebe lagu garanayn. Al-Xajj (41-46).

47. waxay Dedejisan Cadaab mana Baajinaayo Eebe Yaboohiisa, Maalin Eebe Agtiisana waxay la mid tahay kun Sano oo waxaad Tirinaysaana.

وَيَسْتَعْجِلُونَكَ بِالْعَذَابِ وَلَنْ يُخْلِفَ اللَّهُ وَعْدَهُ
وَأَتَتْ بِرَوْمٍ إِعْدَابًا كَأَلْفِ سَنَةٍ مِمَّا
تَعُدُّونَ ﴿٤٧﴾

48. Badanaa Magaalo aan u Sugnay* iyadoo Daalimad ah, Markaas aan Qabtay Xaggayga Umbaana loo Ahaan.

وَكَيْفَ تَمْلِكُ لَهَا وَهِيَ ظَالِمَةٌ لِنَفْسِهَا
أَتَّخَذَتْهَا وَالِكَ الْمَصِيدُ ﴿٤٨﴾

49. waxaad Dhahdaa Dadow waxaan uun Anigu idiin ahay Dige Cad.

قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّمَا أَلُكُمُ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٤٩﴾

50. kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican waxay mudan Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh (Janno).

فَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ مَغْفِرَةٌ
وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٥٠﴾

51. kuwa u Socda (Xumaanta) Aayaad-kanaga iyo (isku dayi) inay na daaliyaan kuwaasu waa Ehelka Jaxiimo.

وَالَّذِينَ سَعَوْا فِي آيَاتِنَا مُعَاجِزِينَ أُولَٰئِكَ
أَصْحَابُ الْجَحِيمِ ﴿٥١﴾

Mana Habboona in la soo Dedejisto Ciqaabta Eebe iyo Cadaabkiisa, Illeen Eebe ma Baajiiyo Yaboohiisee, Maalintuna Eebe agtiisa waxay la mid tahay Kun sano oo waxa la Tiriyo ah. waxaana sugnaaday in Nabigu Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxay Gali Fuqarada Muslimiintu Janada ka Hor kuwa Xoolaha leh Maalin Nuskeed Shan Boqol oo Sano cid kastoo la halaagana Eebe umbay la Kulmi oo Abaal marin. Nabiguna waa u Digaha Dadka, Ciddii wanaag Fashana waxay mudan Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharafleh, kuwa Xaqa ka hor imaanna waa Ehelka Naarta. Mana Sinna Xumaanle iyo Sama fale xaqa Raaca oo wanaag u horseeda. Al-Xajj (47-51).

* Ukaadinnay.

52. Rasuulkastoon Dirray ama Nabi Hortaa, markuu wax Akhrin waxbuu ku Tuuraa Shaydaanku Akhriskiisa, markaasuu Baabi'yaa Eebe wuxuu Tuuri Shaydaanku wuxuuna Sugaa Aayaadkiisa, Eebana waa Ogaade Fal-san.

وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ مِنْ رَسُولٍ وَلَا نَبِيٍّ إِلَّا إِذَا
تَمَجَّجَ إِلَى الشَّيْطَانِ فِي أُمْنِيَّتِهِ فَيَنسَخُ اللَّهُ
مَا يُلْقِي الشَّيْطَانُ ثُمَّ يُحْكِمُ اللَّهُ آيَاتِهِ وَاللَّهُ
عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٢﴾

53. si uu uga yeelo waxa Shaydaanku

يَجْعَلُ مَا يُلْقِي الشَّيْطَانُ فَتَنَةً لِلَّذِينَ فِي

Tuuri Fidmo kuwa Quluubtoodu Bugto ee ka Ingagan Quluubta Daalimiintuna waxay ku Suganyihiin Khilaaf (Baadi) Fog.

فَلُوْهُم مَّرْصٌ وَالْقَاسِيَةُ فُلُوْهُمۡ ۗ وَإِنَّ
الْظَّالِمِيْنَ لَئِيْ شِقَاقِيْ يَّعِيْدُ ﴿٥٧﴾

54. inay Ogaadaan kuwa Cilmiga la siiyey «Mu'miniintu» inuu yahay Xaq Eebe ka yimid (Quraanka) oy Rumeeyaan, oy u Khushuucdo Dartiis Quluubtoodu, Allana wuu ku hanuunin kuwa Rumeeyey (xaqa) Jid Toosan.

وَلِيَعْلَمَ الَّذِيْنَ اٰوْتُوْا الْعِلْمَ اَنَّهُ لَاحِقٌ مِّنْ
رَّبِّكَ فَمَيْمُوْا بِوَجْهِكَ فَتُخَيَّبَ لَكَ فُلُوْهُمۡ ۗ وَإِنَّ
اللّٰهَ لَهَادِ الَّذِيْنَ اٰمَنُوْا اِلَى صِرَاطٍ مُّسْتَقِيْمٍ ﴿٥٨﴾

55. kama tagaan kuwa gaalobay Shaki intay ugu Timaaddo Saacaddu Kado ama u yimaaddo cadaab Maalin daran.

وَلَا يَزَالُ الَّذِيْنَ كَفَرُوْا فِيْ مِرْيَةٍ مِّنْهُ حَتّٰى تَأْتِيَهُمُ
السَّاعَةُ بَغْتَةً اَوْ يَأْتِيَهُمْ عَذَابٌ يَّوْمٍ عَقِيْبٍ ﴿٥٩﴾

56. Xukunka Maalintaas Eebaa iska leh, wuuna kala Xukmin Dhexdooda, kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican waxay Gali Janada Naciimo.

الْمَلٰٓئِكُ يَوْمَئِذٍ يَّحْكُمُ بِنَهْيِ رَبِّهٖمْ
فَالَّذِيْنَ ءَامَنُوْا وَعَمِلُوا الصَّالِحٰتِ فِيْ
حَيٰٓتِ النَّعِيْمِ ﴿٦١﴾

57. kuwa Gaalobay oo beeniyey Aayaadkanagana kuwaas waxaa u Sugaaday Cadaab wax Dulleeya.

وَالَّذِيْنَ كَفَرُوْا وَكَذَّبُوْا بِآيٰتِنَا
فَاُولٰٓئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ مُّهِمٌ ﴿٦٢﴾

Qisada kutubta Qaarkeed qorto oo ku Saabsan in Shaydaan Nabiga wax ugu Tuuray intuu Sanamyada Sheego ma aha wax Sugan, waana ka Dhawrsanyahay Nabigu Arrintaas, Hase yeeshee Gaaladaa Shaydaan Moodsiiyey Arrintaas, Eebana Xumaanta wuu Tiraa Xaqana wuu Sugaa, si Cidduu Dhuminna u Muuqato Tii Toosnaanna u Muuqato, iyo inay Mu'miniintu ogaadaan Xaqa, Jidka ku Toosan, Gaalana Xumaan Madayso intay uga Timaaddo Saacadda ama Ciqaab daran, Xukunka Qiyaamadana Eebaa iska leh, isagaana kala Xukumi Dhexdooda, kuwa Fiicanna Jannuu Galin kuwa Xunna Naar Daran, Nabiguna waa ka fogyahay inuu Shaydaan u soo Dhawaado. Al-Xajj (52-57).

58. kuwa ku Hijrooday Jidka Eebe Haddana la Dilo ama dhinta wuxuu ku Arzaaqi kuwaas Eebe Rizqi Wanaagsan, Eebana wa ku Khayrroon yahay Rizqigiisu.

وَالَّذِيْنَ هَاجَرُوْا فِيْ سَبِيْلِ اللّٰهِ ثُمَّ قُلُوْا
اَوْمَانًا اٰيْرُزْقَهُمُ اللّٰهُ رِزْقًا حَسَنًا وَّاُولٰٓئِكَ
اللّٰهُ لَهُمْ خَيْرُ الرِّزْقِيْنَ ﴿٦٣﴾

59. wuxuuna Galin Meel ay ka Raalli Noqon (Janno) Eebana waa Oge Dulbadan.

لِيَدْخُلْنَهُمْ مُّدَخَلًا يَّرْضَوْنَہٗ ۗ وَإِنَّ اللّٰهَ
لَعَلِيْمٌ حَلِيْمٌ ﴿٦٤﴾

60. wa saas, Ruuxii Ciqaaba inta la Ciqaabay oo kale Markaas la gardaraysto wuu u Gargaari Eebe, Eebana waa Cafiye Dhaafa.

۞ ذٰلِكَ وَمَنْ رَّاقَبَ بِمِثْلِ مَا عُرِبَ بِهٖ
ثُمَّ يُؤْتِ عَلَيْهِ لَيْسَ مَرْتَبُهُ اللّٰهُ اِنَّ اللّٰهَ
لَسَفُوْرٌ عَفُوْرٌ ﴿٦٥﴾

61. waxaana ugu wacan in Eebe Galiyo Habeenka Maalinta Galiyana Maalinta Habeenka, Eebana waa Maqle Arka. ذَٰلِكَ بِأَنَّ اللَّهَ يُولِجُ اللَّيْلَ فِي النَّهَارِ وَيُؤَلِّجُ النَّهَارَ فِي اللَّيْلِ وَأَنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ بَصِيرٌ ﴿١١﴾

62. waxaana ugu Wacan Taas in Eebe Xaq (Sugan) yahay, waxay Caabudi oo ka soo Hadhayna Baadil yahay, Eebana yahay Sarreeye Weyn. ذَٰلِكَ بِأَنَّ اللَّهَ هُوَ الْحَقُّ وَأَنَّ مَا يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ هُوَ الْبَاطِلُ وَأَنَّ اللَّهَ هُوَ الْعَلِيُّ الْكَبِيرُ ﴿١٢﴾

Ciddii dar Eebe u Hijroota oo Jahaad lagu Dilo ama iska Dhimata wuxuu Eebe ku Arzaqaa Rizqi Wanaagsan oo ah inuu Galiyo Janno ay ka Raalli noqon. Tan kale Ciddii la Dulmiyo lana Gardaraysto Xaq darro wuu u Gargaari Eebe hadduu Gargaar Muto oo toosanyahay Xaqana ku Joogo, Wuxuu yidhi Sharaxbiil Binu Samdha: Waxaa Dheeraaday Nagaadiganagii Dhulka Ruum markaasuu na maray Salmaan (Al Faarisi) wuxuuna yidhi waxaan maqlay Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeele) oo leh: Ruuxii Dhinta isagoo Muraabid ah (Gaalada Dhulka ka Dhawri) waxaa u Socon Ajir la Mid ah kaa soo kale, Rizqina waa la siin waxaana laga nabad galin kuwa wax Fidmeeya. Habeenka iyo Maalintana Eebaa iska leh Maamulkooda, waana Eebaha Xaqa ah, waxa la Caabudo ee ka soo hadhayna Baadil yahay waana Sarreeyaha wayn, waana in Eebahaas si Dhab ah loo Caabudo Xagga Caqiidada, Xukunka, Akhalaaqda, Macaamilada, wax walbana lagu Dhaqo Sharcigiisa xaqa ah, ee Caadilka ah. Al-Xajj (58-62).

63. Miyeydaan Ogayn in Eebe ka soo Dejiyo Samada Biyo oo ahaado Dhulku Cagaar, Eebana waa Oge Xeel Dheer. الَّذِينَ أَنْزَلَ اللَّهُ أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَتَصْبِحُ الْأَرْضُ مُخْضَرَةً إِنَّ اللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٌ ﴿١٣﴾

64. Waxaa u Sugnaaday Eebe waxa Samaawaadka ku Sugan iyo waxa Dhulka ku Sugan, Eebana wa Hodan Mahadsan. لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَإِنَّ اللَّهَ لَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَمِيدُ ﴿١٤﴾

65. Miyeydaan ogayn in Eebe idiin Sakhiray waxa ku sugan Dhulka iyo Markabka Socda Badda Dhexdeeda Amarka Eebe, wuxuuna ka Hayaa Samada inay ku dhacdo Dhulka Idinka Eebe mooyee, Eebana Dadka waa u Naxariis Badane. الَّذِينَ أَنْزَلَ اللَّهُ سَخَّرَ لَكُمْ مَاءَ الْأَرْضِ وَالْفَلَكَ تَجْرِي فِي الْبَحْرِ بِأَمْرِهِ وَمُمْسِكِ السَّمَاءَ أَنْ تَقَعَ عَلَى الْأَرْضِ إِلَّا بِإِذْنِهِ إِنَّ اللَّهَ بِالنَّاسِ لَرؤُوفٌ رَحِيمٌ ﴿١٥﴾

66. Eebana wa kan idin Nooleeya, Haddana idin Dila haddana idin Nooleeya Dadkuna waa Diidmo badane (Nicmada Eebe). وَهُوَ الَّذِي أَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ إِنَّ الْإِنسَانَ لَكَفُورٌ ﴿١٦﴾

67. Ummad kasta waxaan u yeelay Hab Cibaado oy ku Cibaadaysan ee yeyna kugula Doodin Amarka (Xaqa) uguna لِكُلِّ أُمَّةٍ جَعَلْنَا مَنْسَكًا هُمْ نَاسِكُوهُ فَلَا يَنْتَعِبُونَكَ فِي الْأَمْرِ وَأَدْعُ إِلَى رَبِّكَ إِنَّكَ لَعَلَى

yeedh Xagga Eebahaa Adigu waxaad ku Sugantahay Hanuun Toosane.

هُدًى مُسْتَقِيمًا ﴿٦٧﴾

68. Hadday kula Doodaan waxaad dhahdaa Eebaa Og waxaad Falaysaan.

وَإِنْ جَدَلُوا فَقُلِ اللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿٦٨﴾

69. Eebana wuu kala Xugmin Dhexdooda Maalinta Qiyaame waxay isku Khilaafsanaayeen.

اللَّهُ يَحْكُمُ بَيْنَكُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فِيمَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿٦٩﴾

Waxaa ku Tusin Qudrada Eebe iyo Awooddiisa Roobka Doogga soo Bixin, Dhulkana Cagaara oo Qurxiya, iyo Awooddiisa cirka iyo Dhulka iyo Hodannimadiisa. Waxaa kale oo Tusin Ilaahnimadiisa Sakhriidda waxa Dhulka, ku sugan iyo Doonta ku Socota Badda Amarka Eebe iyo inuu Cirka ka hayo inuu ku Dhaco Dhulka, waana u Naxariistaha Dadka, waan kan wax Nooleeya waxna Dila, hadana Nooleyn, Dadse waa Gaalimo Badane, Ummad kastana Eebe wuxuu u yeelay Cibaado ay Gudato ee yaan Xaqa lagugala Murmin, uguna yeedh Xaqa waxaad ku sugantahay Jid toosane, hadday kula Murmaanna Eebaa Og waxay fali isagaana kala Xukumi Dhexdooda Qiyaamada waxay isku Diidanyihiin. Saas darteed waa inaad Xaqa ku Toosnaato oon lagaa Leexin war Dad iyo Dhagartiisna maqlin si uu kuugu Gargaaro Eebe una Liibaantid. Al-Xajj (63-69).

70. Miyaadan Ogayn in Eebe Ogyahay waxa ku Sugaan Samada iyo Dhulka, Arrintaasna waxay ku Sugantahay Kitaab, Arrintaasuna Eebe waa u Fududahay.

أَلَمْ تَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ إِنَّ ذَلِكَ فِي كِتَابٍ إِنَّ ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرٌ ﴿٧٠﴾

71. waxay Caabudi Eebe ka sokow Wuxuusan u soo Dejinin Xujo oyna u Lahayn cilmi, umana Sugna Daalimiinta Gargaare.

وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَمْ يَنْزِلْ بِهِ سُلْطَانًا وَمَا لَيْسَ لَهُمْ بِهِ عِلْمٌ وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ نَصِيرٍ ﴿٧١﴾

72. Marka lagu Akhriyo korkooda Aayaadkanaga oo Cad cad waxaad ka Garataa Wajiyada kuwa Gaaloobay Diido, waxayna u Dhawyihiin inay ku Boodaan (Dhibaan) kuwa ku Akhrin Aayaadkanaga, waxaad Dhahdaa May-diinka Warramaa wax ka Shar badan Taas, waa Naar u Darbay Eebe kuwa Gaaloobay, Iyadaana u Xun Meel Loo Ahaado.

وَإِذَا نَسِئْتُمْ إِلَيْنَا بَيِّنَاتٍ تَعْرِفُ فِي وُجُوهِ الَّذِينَ كَفَرُوا الْمُنْكَرَ يَكَادُونَ يَسْطُونَ بِالَّذِينَ يَتْلُونَ عَلَيْهِمْ آيَاتِنَا قُلْ أَفَأَنْتُمْ بَشَرٌ مِنْ ذَلِكُمْ أَنْتَارُ وَوَعْدَ اللَّهِ أَلْذِذُ كَفَرُوا وَبَشَرٌ الْمُصِذُ ﴿٧٢﴾

73. Dadow waxaa layeelay Tusaale ee Dhagaysta, kuwaad Baryeysaan (Caabudaysaan) Eebe ka Sokow ma Abuurraan Daqsi haba u Kulmeene, Hadduu ka Qaato Daqsi waxna kama Cesha-

يَتْلَاهَا النَّاسُ صُرِبَ مَثَلٌ فَاَسْتَمِعُوا لَهُ وَارْتَبِ الَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ لَنْ يَخْلُقُوا ذُبَابًا وَلَوْ اجْتَمَعُوا لَهُ. وَإِنْ يَسْأَلْهُمْ الذُّبَابُ سَبِيحًا لَا

daan waxaa Tabar yar kan wax Dooni ﴿٧٦﴾ يَسْتَنْقِذُوهُ مِنْهُ ضَعْفَ الظَّالِمِ وَالْمَأْظُورِ
iyo kan la Dooni.

74. Mayna Waynayn Eebe Mudnida ﴿٧٧﴾ مَا قَدَرُوا اللَّهَ حَقَّ قَدْرِهِ إِنَّ اللَّهَ لَعَلَّيْ لَعَلَّيْ عَزِيزٌ
Weynidiisa, Ebana waa Xoog Badane Adkaada.

Eebana waa Ogyahay waxa Cirka iyo Dhulka ku Sugaan, wax walbana Kitaabay ku Suganyihiin, Eebana waa u Fududahay Xaalkaasu, mana Habboona in la Caabudo wax Eebe ka soo Hadhay oon waxba ahayn, wax Eebe wax uga Tarina ma jiro Daalimiinta, marka Xaq Diidayaasha lagu Akhriyo Aayaadka Eebe oo Cad Cad waxaad Aragtaa Wajiga Gaalada oo Diidan oo u Dhaw inay ku Boodaan Cidda Akhriin Aayaadka Eebe, waxaase Shar ku dhanyahay Naarta Eebe u Darbay kuwa Gaaloobay Iyadaana u Xun meel loo Ahaado, waxay Caabudi oo Eebe ka soo hadhayna ma Karaan Abuur Daqsi hadday kulmaan, hadduu wax ka qaatana kama Dhacsan karaan, Kan caabudi iyo Kan la Caabudiba waa Tabar yar Yihiin, mana waynayn Gaalada Eebe Mudnaantiisa, waana Xoog badane Adkaada, cid la mid ah ama ka Dulmi badan oo ka Xun ma Jirto Cid Caabudday wax Eebe ka soo Hadhay. Al-Xajj (70-74).

75. Eebe wuxuu ka Doortaa Malaa'igta Rasuullo Dadkana (Rasuullo) Eebana waa Maqla Arka.

﴿٧٥﴾ اللَّهُ يَصْطَفِي مِنَ الْمَلَائِكَةِ رُسُلًا وَمِنَ النَّاسِ إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ بَصِيرٌ ﴿٧٥﴾

76. Wuxuuna Ogyahay waxa Hortooda ah iyo waxa gadaashooda ah Xagga Eebaana loo Celin Umuuraha.

﴿٧٦﴾ يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَإِلَى اللَّهِ تُرْجَعُ الْأُمُورُ ﴿٧٦﴾

77. kuwa (Xaqa) Rumeeyow Rukuuca oo Sujuuda oo Caabuda Eebihiin Falana Khayrka waxaad u Dhawdhiin inaad Liibaantaane.

﴿٧٧﴾ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَرْكَبُوا وَأَسْجُدُوا وَاعْبُدُوا رَبَّكُمْ وَاقْعُدُوا الْحَدِيثَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٧٧﴾

78. kuna Dadaala dar Eebe Dadaal Dhab ah, Isagaana idin Doortay, mana yeelin Diinta Dhib, waa Milladdii Aabihiin Ibraahim, isagaana (Eebe) Idiinku Magacaabay Muslimiin horay iyo Quraankan si Rasuulku marag korkiinna ugu Noqdo, idinkuna aad Marag u ahaataan Dadka, ee Ooga Salaadda oo Bixiya Zakada oo Qabsada Eebe isagaa Gargaarihiina ah isagaana u Fiican Sayid isagaana u Fiican Gargaare.

﴿٧٨﴾ وَجَاهِدُوا فِي اللَّهِ حَقَّ جِهَادِهِ هُوَ اجْتَبَاكُمْ وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِي الدِّينِ مِنْ حَرَجٍ مَلَّةً أَيْ كُرُوا بِيْرِهِمْ هُوَ سَمَّاكُمْ الْمُسْلِمِينَ مِنْ قَبْلِ وَفِي هَذَا لِيَكُونَ الرَّسُولُ شَهِيدًا عَلَيْكُمْ وَتَكُونُوا شُهَدَاءَ عَلَى النَّاسِ فَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَاعْتَصِمُوا بِاللَّهِ هُوَ مَوْلَاكُمْ فَنِعْمَ الْمَوْلَى وَنِعْمَ النَّصِيرُ ﴿٧٨﴾

Eebe isagaa Og Meeshu wax ka Diri iyo Cidduu Diri iyo Cidda loo Diriba, Siduu wax walba u Ogyahay. Tan kale wuxuu Fari Eebe in Salaadda la Oogo Eebana si Dhab ah loo Caabudo, Khayrkana la Falo si loo Liibaano, Dar Eebana loo Jahaado, illeen Ilaahaybaa Doortay Ummaddan Muxamadiyadee, Dhibna ma Yeelin Diintii, waxay waafaqsantahay Diintii Nabi Ibraahim, Ilaahaybaana Muslimiin nagu Magacaabay mar hore, iyo Quraankaba.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Marag Buu noo yahay Ummadduna waa Maragga Dadka kale, waase in Salaadda la Oogo, Zakadana la Bixiyo, lana Qabsado Xadhigga Eebe, Illeen isagaa Sayidkeena iyo Gargaaraheenna ah una Wanaagsan gargaaree, waana Kaas Islaamka Toosan oo Wanaag, Islaanimo, Xumaan ka tagid iyo Samo fal ah, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Ruuxii u Yeedha Yeedhid Jaahiliyo wuxuu Dhex fadhiisan Jahannamo, Markaasuu Nin Yidhi Rasuulka Eebow Haba Soomo oo Tukado? Markaasuu Yidhi Haba soomo oo Tukado, u Yeedha Yeedhidda Alle oo ah inuu Idinku Magacaabay Muslimiin Addoomada Eebow. Al-Xajj (75-78).



Suurat Al-Mu'minuun

سُورَةُ الْمُؤْمِنُونَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa Dhab ahaan u Liibaanay Mu'miniinta.

قَدْ أَفْلَحَ الْمُؤْمِنُونَ ﴿١﴾

2. Ah kuwa Salaaddooda ku Khushuucan.

الَّذِينَ هُمْ فِي صَلَاتِهِمْ خَاشِعُونَ ﴿٢﴾

3. Oo ah kuwa Hadalka Macno Darro ka Jeedsada.

وَالَّذِينَ هُمْ عَنْ اللَّغْوِ مُعْرِضُونَ ﴿٣﴾

4. Oo ah kuwa Fala Zakada «bixiya».

وَالَّذِينَ هُمْ لِلزَّكَاةِ فَاعِلُونَ ﴿٤﴾

5. Oo ah kuwa Furuujtooda Ilaaliya.

وَالَّذِينَ هُمْ لِأُوجِهِنَا حَافِظُونَ ﴿٥﴾

6. Haweenkooda iyo waxay Hanatay Gacantoodu mooyee, laguma Dagaalo taas.

إِلَّا عَنَّا أَرْجَاؤُهُمْ وَأَوْمَانُهُمْ كَذَّبَتْ ثَمُودُ بِطَغْوَاهُمْ إِذِ انبَغَطَتْ لَهُمْ أَصْفَادُ آلِهَتِهِمْ فَذَرَوْهُم مُّذْمَعِينَ ﴿٦﴾

7. Ruuxiise Doona waxaas wax ka Soo Hadhay kuwaasu waa Xad Gudbayaal.

فَمَنْ أَتَّبَعْنَا لَوْ كُنَّا نَعْلَمُ الْغُيُوبَ ﴿٧﴾

8. Waa kuwa Ammaanadooda iyo Ballankooda Dhawra.

وَالَّذِينَ هُمْ لِأَمْتِنِهِمْ وَعَهْدِهِمْ رَاعُونَ ﴿٨﴾

9. waana kuwa Salaadda Ilaaliya.

وَالَّذِينَ هُمْ عَلَى صَلَاتِهِمْ يُحَافِظُونَ ﴿٩﴾

10. Kuwaasu waa kuwa Dhaxli.

أُولَئِكَ هُمُ الْوَارِثُونَ ﴿١٠﴾

11. oo ah kuwa Dhaxli Firdowsa wayna ku Dhexwaari.

الَّذِينَ يَرْتُوبُونَ أَلَمْ نَجْعَلِ لِكُلِّ أُمَّةٍ رَّجُلًا مِّنْهُمْ لِيُشِيرُوا إِلَيْهِمْ فَآذَنُوا لَهُمْ حَيْثُ رَأَوْنَاهُمُ يُحِيطُونَ بِشَيْءٍ مِّنْ أَمْرِنَا لَئِن كُنَّا لَنَاصِرِينَ ﴿١١﴾

Suuraddan waxaa lagu Magacaabaa Suuratul Mu'minuun, waxayna ku Billaabatay Liibaanta Mu'miniinta ku khushuuca Salaadda, oo Macna la'aanta hadal ah ka Jeedsada, oo Zakada Fala, oo iska Dhawra waxaan Eebe u Xalaalayn, oo Amaanada iyo Ballankooda ilaaliya, Salaaddana ilaaliya, kuwaasuna wa uun kuwa Dhaxli Janada Fardowsa kuna Waari Dhexdeeda. Waana Taas Tilmaanta Dhabta ah ee Ruuxa Mu'minka ah ee Mudan Liibaan iyo Jannada Eebe, waana Liibaan Aan wax lamid ah jirin. Caa'isha Eebe ha ka raalli Noqdee waxaa la warsaday Dabeecaddii Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxayna Tidhi: Dabeecaddiisu waxay ahayd Quraanka, waxayna Akhriday billowga Suuraddan tan iyo Aayadda Sagaalad. Mana Qarsoona Wanaagga Salaadda, Bixinta Zakada, ka Jeedsashada Hadal Macno Darro, ka Fogaanshaha Zinada, Ilaalinta Ammaanada iyo Ballanka iyo Wanaagga ku Dadaalka. Al-Mu'minuun (1-11).

12. waxaan ka Abuuray Dadka wax laga soo Soocay Dhoobo.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ مِنْ سُلَالَةٍ مِنْ طِينٍ ﴿١٢﴾

13. Markaasaan ka Yeellay Dhibic ku Jirta meel Sugaan.

ثُمَّ جَعَلْنَاهُ نُطْفَةً فِي قَرَارٍ مَكِينٍ ﴿١٣﴾

14. Markaasaan ka Abuuray Dhibicdii Calaqa kana Abuuray Calaquadii Goosin, kana Abuuray Goosintii Lafo oon Huwinnay Lafihii Hilib Markaasaan ka ahaysiinay Khalqi kale, waxaa Khayr Badnaaday Eebaha Abuurkiisu Fiicanyahay.

ثُمَّ خَلَقْنَا النُّطْفَةَ عَلَقَةً فَخَلَقْنَا الْعَلَقَةَ مُضْغَةً فَخَلَقْنَا الْمُضْغَةَ عِظْمًا فَكَسَوْنَا الْعِظْمَ لَحْمًا ثُمَّ أَنْشَأْنَاهُ خَلْقًا آخَرَ وَتَبَارَكَ اللَّهُ أَحْسَنُ الْخَالِقِينَ ﴿١٤﴾

15. Markaas Idinku Arrintaas ka Dib waad Dhimanaysaan.

ثُمَّ إِنَّكُمْ بَعْدَ ذَلِكَ لَمَعِينُونَ ﴿١٥﴾

16. Markaas Maalinta Qiyaame Laydin soo Bixin.

ثُمَّ إِنَّكُمْ رَوِّدَ الْغَيْمَةِ تُبْعُونَ ﴿١٦﴾

17. waxaana ku Abuuray Korkiinna Toddobo Samo man nihin mid Khalqiga Halmaansan.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا قَوْمَكَ مِنْ سَبْعِ طَرَائِقٍ وَمَا كُنَّا عَنِ الْخَلْقِ غَافِلِينَ ﴿١٧﴾

Aayadahanna waxay Caddayn Dadka Asalkiisa iyo Sida Eebe u Abuuray una soo Mareen Abuur kala Duwan, waxaana wayn oo Ammaan Muta Xumaanna ka Dheer Ilaaheenna Wanaajiyaa Abuurka, Markaas ka Dibna, wuu Dilaa, wuxuuna soo Bixiyaa Maalinta Qiyaame, waana kan ahaysiiyey Korkooda Toddobo Samo oon Halmaansaneyn Khalqiga. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Eebe wuxuu ka Abuuray (Nabi) Aadam ka Soo qaad Dhulkoo Dhan, waxayna ahaadeen Carruurtiisu sida Dhulka, Mid Cas, mid Cad mid Madow iyo mid u Dhexeeya iyo mid Fiican iyo mid Xun iyo mid u Dhexeeya. Al-Mu'minuun (12-17).

18. Waxaan ka soo Dejinay Samada Biyo Qiyaasan, waxaana Dejinay dhulka inaan la Tagnana waan karraa.

وَأَنْزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مَاءً يُقَدِّرُ فَاسْتَكَنَّهُ فِي الْأَرْضِ ۗ وَنَزَّلْنَا عَلَىٰ ذَهَابٍ بِهِ لَقْدِيرُونَ ﴿١٨﴾

19. waxaana idinku Ahaysiinnay Beero Timir ah iyo Cinabyo oo Dhexdeeda Khudaar Badani ku sugantahay ood wax ka Cuntaan.

فَأَنْشَأْنَا لَكُمْ بِهِ جَنَّاتٍ مِنْ نَجِيلٍ وَأَعْنَبٍ لَكُمْ فِيهَا أَنْوَاعٌ كَثِيرَةٌ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ ﴿١٩﴾

20. Iyo Geed ka Baxa Duur Siina oo soo saarta Subag iyo Koosaar kuwa Cuni.

وَسَجْرَةٍ تَخْرُجُ مِنْ طُورِ سَيْنَاءَ تَنْبُتُ بِالذَّهْنِ ۗ وَصَيْغَرَ لِذَاكِلَيْتٍ ﴿٢٠﴾

21. Waxaa idiinku Sugnaaday Xoolaha Waano, waxaana idinka Waraabinnaa

وَأَنَّ لَكُمْ فِي الْأَنْعَامِ لَعِبْرَةً لِيَتَّقُوا اللَّهَ فِي طُورِهَا

waxa Caloosheeda ku Sugaan waxaana idinku Sugaan Manfaco badan, Xaggeedaadna wax ka Cuntaan.

وَلَا تُكْرِهُنَّهَا مِنْ فَئِئَةٍ كَثِيرَةٍ وَرِيئَتَهَا تَأْكُلُونَ ﴿١١﴾

22. Korkeeda iyo Markbka Korkeeda yaana laydinku Xambaaraa.

وَعَلَيْهَا وَعَلَى الْفُلْكِ تُحْمَلُونَ ﴿١٢﴾

23. Waxaan u Dirray (Nabi) Nuux Qoomkiisii wuxuuna Yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe idiinma sugnaannin Ilaah ka soo Hadhaye, miyeydaan dhawrsanayn.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ فَقَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُ وَآفَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٣﴾

24. waxayna Dheheen Madaxdii Gallowday oo Qoomkiisa ahaa kanu ma aha waxaan Dad idin la midah ahayn, wuxuuna doonayaa inuu idinka Fadilmo, Hadduu Doono Eebe wuxuu soo Dejinlaaha Malaa'ig, manaan ka Maqalin Arrintan Aabayaalkanagii Horreyey.

فَقَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِن قَوْمِهِ مَا هَذَا إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُرِيدُ أَنْ يَفْضَلَ عَلَيْكُمْ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَأَنْزَلَ مَائِكُمْ مَّا سَمِعْنَا بِهَذَا فِي آبَاءِنَا الْأَوَّلِينَ ﴿١٤﴾

25. Ma aha waxaan Nin Waalan ahayn ee Suga Tan iyo Muddo, Geerida.

إِنَّ هُوَ إِلَّا رَجُلٌ بِهِ حِجَّةٌ قَدِيمَةٌ وَإِنَّهُ سَخِيبٌ ﴿١٥﴾

Waxaa Awoodda Eebe iyo Qudradiisa ka mid ah Roobka uu Samada ka keeno markaas Dhulka ku Kaydiyo Hadduu Doono uu kaxayn karo, kuna soo Bixiyo Beero wax laga Cuno, sida Geedka Subagga leh ee Sina oo kale, Xoolahana Eebaa inoogu Nicmeeyey, Aayadaha kalena waxay ka warrami Nabi Nuux iyo Qoomkiisii, iyo Siday u Beeniyeen, wax badan yuuna Quraanku ka Qisooday waxaase Muhiim ah in laga Leexdo Jidka kuwa Xun lana Raaco Xaqa iyo Wanaagga. Al-Mu'minuun (18-25).

26. wuxuu yidhi Eebow iiga Gargaar Beenintooda.

قَالَ رَبِّ انصُرني بما كذبتون ﴿١٦﴾

27. Waxaana u waxyoona ku Samee Doon Ilaalintanada iyo Waxyiganaga, markuu yimaado Amarkanagu oo Burqado Tanuurku, Gali Doonta Nooc kastaba Labo Labo iyo Ehelkaaga Ciddii Hadal u Hor maray (Halaag) mooyee oo ka mid ah Haygulana Hadlin (Xaalka) kuwa Dulmiga falay iyaga waa la Maanshayne.

فَأَوْحَيْنَا إِلَيْهِ أَنْ اصْنَعِ الْفُلْكَ بِأَعْيُنِنَا وَوَحَيْنَا فَإِذَا جَاءَ أَمْرُنَا وَفَارَ التَّنْوِيرُ فَاسْلُكْ فِيهَا مِن كُلِّ زَوْجٍ مِّنْ نَّسَبٍ وَأَهْلِكَ إِلَّا مَن سَبَقَ عَلَيْهِ الْقَوْلُ مِنْهُمْ وَلَا تُخَاطِبُنِي فِي الَّذِينَ ظَلَمُوا إِنَّهُمْ مُّعْرِضُونَ ﴿١٧﴾

28. Markaad Korto Adiga iyo inta kula

فَإِذَا أَسْرَوْتَ أَنْتَ وَمَنْ مَعَكَ عَلَى الْفُلْكِ فَقُلِ الْحَمْدُ

Jirta Doonta waxaad Dhahdaan Mahad Eebaa iska leh ah kan iga koriyey Qoomka Daalimiinta ah.

لِلَّذِي نَجَّحْتُمُ الْفُلُوفَ الظَّالِمِينَ ﴿٢٨﴾

29. Waxaadna Dhahdaa Eebow I daji Guri la Barakeeyey Adaa u Khayrroon Dejiyee.

وَقُلِّبْنَا لِنُزِيلِ مَنَازِلِ مُبَارَكًا وَأَنْتَ خَيْرُ الْمُنزِلِينَ ﴿٢٩﴾

30. Arrintaasna waxaa ku Sugaan Aayaad waxaana nahay kuwo wax Intixaama.

إِنِّي فِي ذَلِكَ لَكَايِتٌ وَإِنْ كَا الْمُبْتَلِينَ ﴿٣٠﴾

Wuxuuna ku Dhammaaday Xaalkii kuwaas in Biyo lagu Halaagay, Eebana koriyey Nabi Nuux iyo Intii Rumaysay, taasina waa Sunada eebe iyo Intixaamkiisa, Qisaduna waxay aad ugu Faah Faahsantahay Suuradda Huud, waxayna ku Tusin Lagdanka Xaqa iyo Xumaanta, Tan iyo Waqtigii Nabi Nuux iyo inaan la waayeyn Xaqdiidayaal Xumaanta Jecel oo Wanaagga Neceb, waxaase Hadhi Wanaagga iyo Khayrka, waxaana Tagi Xumaanta iyo Gaalimada iyo Kibirka. Al-Mu'minuun (26-30).

31. Markaasaan ahaysiinay Gadaas-hood Qarni Kale.

تَوَّأْنَانَا مِنْ بَعْدِهِمْ قُرْآنًا حَرِيبٍ ﴿٣١﴾

32. waxaana u Dirray Dhexdooda Rasuul ka mid ah Caabuda Eebe idiinma sugna Ilaah Eebe ka soo Hadhay ee Miyeydaan Dhawrsanayn.

فَأَرْسَلْنَا فِيهِمْ رَسُولًا مِنْهُمْ أَنْ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَهِ غَيْرُهُ، أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٣٢﴾

33. waxay Dheheen Madaxdii Qoomkiisa ee ah kuwii Gaaloobay oo Becniyey la Kulanka Aakhiro oon ugu Raaxaynay Nolosha Dhaw, kani ma aha waxaan Dad idinla mid ahayn Cunina waxaad Cunaysaan, Cabbina waxaad Cabbaysaan.

وَقَالَ الْمَلَأَمِنْ قَوْمِهِ الَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِإِفْعَاءِ الْآخِرَةِ وَأَتَوَقَّئُهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا مَا هَذَا إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ بَأْسٌ لِّمَنْ تَأْكُلُ مِمَّا تَأْكُلُونَ مِنْهُ وَيَشْرَبُ مِمَّا تَشْرَبُونَ ﴿٣٣﴾

34. Haddaad Adeecdaan Dad idila mid ah idinku waa Khasaarteen.

وَلَيْنَ أَطْعَمَهُمْ نَبَأًا مِّثْلَ لَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ إِذَا لَحِيسُونَ ﴿٣٤﴾

35. Ma wuxuu idiin Yaboohi Markaad Dhimataan ood Noqotaan Carro iyo Lafo in laydin soo Bixin.

أَيَعِدُّكُمْ أَنْكُمْ إِذَا مِتُّمْ وَكُنْتُمْ تُرَابًا وَعِظْمًا أَنْكُمْ تُخْرَجُونَ ﴿٣٥﴾

36. Waa Fogtahay oo Fogtahay waxa laydinku Goodin.

* هِيَ هَاتِ هَيْهَاتَ لِمَا تُوعَدُونَ ﴿٣٦﴾

37. ma aha waxaan Noloshanada Ad-duunyo ahayn, waanu Dhiman (Qaar) oonnu Noolaan (Qaar) kuwa la soo Bixinna ma Nihin.

إِنْ هِيَ إِلَّا حَيَاتُنَا الدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا وَمَا نَحْنُ بِمَبْعُوثِينَ ﴿٣٧﴾

38. Mana aha waxaan Nin ku Been Abuurtay Eebe ahayn, mana nihin kuwo u Rumeyn.

إِنَّ هُوَ إِلَّا رَجُلٌ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا وَمَا نَحْنُ لَهُ
بِعُومِينَ ﴿٣٨﴾

39. Wuxuuna yidhi Eebow iiga Gargaar Beenintooda.

قَالَ رَبِّ اضْرُرْنِي بِمَا كَذَّبُونَ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuu yidhi Eebe Mudda Yar ka Dib yey ahaan kuow Nidaamooda*.

قَالَ عَمَّا قَلِيلٍ لِّيُصْبِحُنَّ نَادِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. waxaana ku Qabatay si Xaq ah Qaylo waxaana ka yeellay Daaddoor ee Fagaansho Haw Sugnaado Daalimiinta.

فَأَعَدَّتْهُمْ الصَّيْحَةَ بِالْحَقِّ فَجَعَلْنَاهُمْ غُرَاءً
فَبَعْدَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٤١﴾

Nabi Nuux Gadaashiis wuxuu Eebe Diray Rasuullo kale, waxaana beeniyey qoomkoodii iyagoo Sheegi inay la mid yihiin una Noolyihiin siday u Nool yihiin, oy Diideenna soo Bixinta iyo Qiyaamada, Nabigana ay Xumaan ku Sheegeen, wuxuuse Baryay Eebe, waxaana ku Dhacay Gaaladii Halaag, taasina waa Abaalka Gaalada Xaqa Diida ee Daalimiinta ah, oo ku Dambayn Qoomamo iyo Khasaare. Al- Mu'minuun (31-41).

* Shallaaya (dib u eegaha).

42. Markaasaan Ahaysiinay Gadaas- hood Quruumo kale.

ثُمَّ أَنشَأْنَا مِنْ بَعْدِهِمْ قُرُونًا آخَرِينَ ﴿٤٢﴾

43. Kamana hor marto Ummadi Ajas- heeda (Waqtiigeeda) kamana Dib mar- to.

مَا تَسْبِقُ مِنْ أُمَّةٍ أَجَلَهَا وَمَا يَسْتَعْرُونَ ﴿٤٣﴾

44. Markaasaan Diray Rasuulladanadii oo Israacsan markastooy Ummad u Yimaaddo Rasuulkoodu waybee- niyaan, waxaana Raacsiinay Qaarkood Qaar (Halaag) waxaana ka yeelay Sheeko Fogaanshaana u Sugnaaday Qoomaan (Xaqa) Rumeyn.

ثُمَّ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا تَتْرًا كُلٌّ مَّا جَاءَ أُمَّةً رَّسُولُهَا كَذَّبُوهُ
فَأَتْبَعْنَا بَعْضَهُمْ بَعْضًا وَجَعَلْنَاهُمْ آحَادِيثًا
فَبَعْدَ الْقَوْمِ الْفَاسِقِينَ ﴿٤٤﴾

45. Markaasaan la Diray (Nabi) Muuse iyo Walaalkiis Haaruun Aayadkanagii iyo Xujo Cad.

ثُمَّ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ وَأَخَاهُ هَارُونَ بِآيَاتِنَا وَسُلَاطِينَ
مُؤْمِنِينَ ﴿٤٥﴾

46. Xagga Fircoon iyo Jameecadiisii (yaana u dirray) wayna is kibriyeen waxayna ahaayeen Qoom is korraysiia.

إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَئِهِ فَاسْتَكْبَرُوا وَكَانُوا قَوْمًا
عَالِينَ ﴿٤٦﴾

47. waxayna dheheen ma waxaanu u

فَقَالُوا أَأَلْوَمُنُ لِبَشَرَيْنِ مِثْلِنَا وَقَوْمُهُمَا

rumayn Labo ruux oo nala mid ah
Qoomkooduna anaga na Caabudo.

لَتَأْعِيدُونَهُ ٤٧

48. Wayna Beeniyeen waxayna Noq-
deen kuwo la Halaagay.

فَكَذَّبُوهُمَا فَكَانُوا مِنَ الْمُهْلَكِينَ ٤٨

49. waxaana Siinay (Nabi) Muuse
Kitaabka inay Hanuunaan.

وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ لَعَلَّهُمْ يَهْتَدُونَ ٤٩

50. waxaana ka yeellay ina Maryamna
iyo Hooyadiis Aayad waxaana u Dun-
nay Meel sare oo Sugnaansho iyo Biyo
Socda leh.

وَجَعَلْنَا آيَاتِنَا آيَةً وَأَوْثِقْنَا إِلَى رِجْوَةٍ ٥٠

ذَاتِ قُرَارٍ وَمَعِينٍ ٥٠

Markaas ka Dibna waxaa Yimid Quruumo kale, oo midna ayna ka hor mari karin kana dib mari karin Waqtigeeda, waxaana loo soo Diray Rasuullo si is raacsan, oo mar kasta la beenin jiray, waase la Ciqaabay Beeniyayaashii, markaasaa Eebe Diray Nabi Muuse iyo Haaruun, wixii Dhexmaray isaga iyo Fircoonna wax badan yuu Quraanku ka warramay waase in lawaano Qaato. Sidoo kale Nabi Ciise iyo Hooyadiisna waa in lagu Waano qaato. Al-Mu'minuun (42-50).

51. Rasuulow ka Cuna Xalaasha,
Falana Wanaag, Anigu waxaad Falay-
saan waan Ogahaye.

يَأْتِيهَا الرُّسُلُ كُلُّوَامِنَ الطَّيِّبَاتِ وَاعْمَلُوا صَالِحًا ٥١

إِنِّي بِمَا تَعْمَلُونَ عَلِيمٌ ٥١

52. Tanna waa Umaddiini (Diinta)
umad (Diin) kaliya anna waxaan ahay
Eebihii ee iga Dhawrsada.

وَإِنَّ هَذِهِ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَأَنَا رَبُّكُمْ ٥٢

فَأَقْضُوا ٥٢

53. waxayse u kala Goosteen Amarkoo-
da Dhexdooda Kooxo, Xisbi kastana
waxa Agtooda ah yey ku Faraxsanyihiin.

فَقَطَّعُوا أَمْرَهُمْ بَيْنَهُمْ زُرًّا كُلٌّ حِزْبٍ بِمَا لَدَيْهِمْ ٥٣

قَرِيبُونَ ٥٣

54. ee Isagaga Tag Halmaanshahooda
Dhexdiisa Tan iyo Muddo.

فَذَرَهُمْ غَمْرُهَا حَتَّىٰ حِينٍ ٥٤

55. ma waxay u Malayn waxaannu Siin
oo Xoolo iyo Caruur ah.

أَيَحْسَبُونَ أَنَّمَا نُسَبِّهُمْ بِهِ مِنْ مِّمَالٍ وَإِنَّا ٥٥

56. Inaanu u soo Hormarinay Khay-
raad wax ma Oga.

سَاعِجَ الْهَمْرِ الْخَيْرِ بَلْ لَا يَشْعُرُونَ ٥٦

57. kuwa uun Ka Cabsada Eebahood
ka Yaabid.

إِنَّ الَّذِينَ هُمُ مِنْ خَشِيَةِ رَبِّهِمْ مُشْفِقُونَ ٥٧

58. kuwa uun Aayaadka Eebahood
Rumeeya.

وَالَّذِينَ هُمْ بِرَبِّهِمْ يُؤْمِنُونَ ٥٨

59. kuwa uun Eebahood aan la Wadaa-

وَالَّذِينَ هُمْ بِرَبِّهِمْ لَا يُشْرِكُونَ ٥٩

jinin.

60. kuwa Bixin waxay bixin Iyadooy ka Cabsan Quluubtoodu inay Xagga Eebe u Noqon.

وَالَّذِينَ يُؤْتُونَ مَاءَهُمْ اَتَوْا وَقُلُوبُهُمْ وَجِلَةٌ اِنَّهُمْ اِلَى رَبِّهِمْ
رٰكِبُونَ ﴿٦٠﴾

61. Kuwaasaa u deg degi Khayraadka una Hormari.

اُولٰٓئِكَ يَسْتَدْعُونَ فِي الْخَيْرَاتِ وَهُمْ لَهَا سٰئِقُونَ ﴿٦١﴾

Eebe wuxuu Faray Nabiyada Inay Cunaan Xalaasha Wanaagna Falaan, wayna Fuliyeen wixii la Faray, Tan kale Xaqu waa mid, Eebana waa Mid kaliya, mana Haboona in la kala Tago ama lays Khilaaf, mana aha Xoolaha iyo Caruurta la Siin Gaalada Khayr loo soo Dedejiyey, ee kuwa Eebe ka Yaaba, ee Rumeeya Aayaadkiisa een u Shariig yeelin, ee wax Bixiya iyagoo ka Cabsan Inay Eebe u Noqon Kuwaasaa Khayrka loo soo Dedejin, una hor mara. Caa'isha Eebe ha ka Raalli Noqdee, waxay warsatay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) in kuwa Cabsan Ay Yihiin: kuwa Xada, Sinaysta, oo Khamro Cabba, wuxuuna yidhi: Ma aha Kuwaas, ee waa kuwa Tukada, Sooma oo Zadaqaysta, Haddana Cabsan (Imaam Axmed). Al-Mu'minuum (51-61).

62. kuma Mashaqayno Naf waxayna karin, Agtanadana waxaa ah Kitaab ku Hadli Xaq, lamana Dulmiyo Iyagana.

وَلَا تُكَلِّفْ نَفْسًا اِلَّا وُسْعَهَا وَاَلَدَيْنَا كِتٰبٌ يَّطٰقُ
بِالْحَقِّ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٦٢﴾

63. waxayse kaga Sugantahay Quluubtoodu Halmaansho Xagga Kaas, waxayna Leeyihiin Camallo Kaas ka Duwan (oo Xun) oy iyagu u Camal Fali.

بَلْ قُلُوبُهُمْ فِي غَمْرٍ وَّ مِنْ هٰذَا وَاَلَهُمْ اَعْمَالٌ مِّنْ دُونِ
ذٰلِكَ هُمْ لَهَا عٰمِلُونَ ﴿٦٣﴾

64. Markaanse ku Qabanno Kuwooda Nicmaysan Cadaab Markaasay Qaylyaan.

حَتّٰى اِذَا اَخَذْنَا مٰمَرًا مِنْهُمْ بِالْعَذَابِ اِذَا هُمْ
يَجْعَرُونَ ﴿٦٤﴾

65. (waxaana la Dhihi) ha Qaylyina Maanta Idinku Xagganaga Laydiin kama Gargaaree.

لَا تَجْعَرُوْا اَلْيَوْمَ اِنَّكُمْ مِّنَّا لَا تُنصَرُونَ ﴿٦٥﴾

66. waxay ahayd Aayaadkeygii Tii lagu Akhriyo Korkiinna waxaadse ahaydeen kuwa Cidhibtiinna Dib ugu noqda (Xaqa Diida).

فَذٰكَلَتْنَا اِيْتِيْنَا عَلَيْهِمْ فَكُنْتُمْ عَلٰى اَعْقَابِكُمْ
تَنْصَرُونَ ﴿٦٦﴾

67. Idinkoo isku Kibrin Quraanka (ama Kacbada iyo Nabiga) Cawaysimina idinkoo Hadal Xun.

مُسْتَكْبِرِيْنَ بِهٖ سَلَحْرًا تَهْجُرُونَ ﴿٦٧﴾

68. Miyeyna Fiirinin Quraanka, mise waxaa u Yimid Waxaan U imaanin Aabayaalkoodii hore.

اَقْلَرِيْدِيْبُوْا اَلْقَوْلَ اَمْرًا جَاءَهُمْ مَّا تَرِيْبَاتٌ اَبَابَةٌ هُمْ
اَلْاَوَّلِيْنَ ﴿٦٨﴾

69. Mise waxayna Aqoonin Rasuulkooda oo ay Diidi.

أَمْ لَمْ يَعْرِفُوا رَسُولَهُمْ فَهُمْ لَهُ مُنْكَرُونَ ﴿٦٩﴾

70. Mise waxay Dhihi waa Waalanyahay, wuxuuse Ula Yimid Xaq Badan-koodse Xaqay Nici.

أَمْ يَقُولُونَ بِهِ جِنَّةٌ بَلْ جَاءَهُم بِالْحَقِّ وَأَكْبَرُهَا الْحَقِّ كَرِهُونَ ﴿٧٠﴾

Aayadahanna wuxuu Eebe ku Sheegay inuusan Cidna ku Mashaqaayn waxayna karin, Eeba Agtiisana yahay Kitaab Xaq ku hadli, Cid la Dulminna ayna jirin, Gaaladuse way Halmaansanyihiin Xaalkaas, waxayna leeyihiin Shaqooyin kale, markase kuwooda Raaxaysan Kado Lagu qabto markaasay Eebe u Qaylyaan, mase Habboona inay Qaylyaan, Illeen horay Xaq u diideene, una Gaaloobeene, Isla wayni iyo Kibirna ku Darsadeene, Miyeynase Fiirin Quraanka, mise waxaa u Yimid waxaan u Imaan Aabayaalkoodii Hore, Miyeynase Aqoonin Rasuulkooda oo Saasay ku Diidi, Mise Waalli bay ku Sheegi, Dhabtuse waa inuu Xaq ula Yimid, iyana ay Xaq Diidi. Jacfar iyo Abu sulyaana waa kuwii u Caddeeyey Najaashi iyo Hiriqla inay Yaqaanaan Nabiga Runtiisa, Ammaanadiisa iyo Nasabkiisaba. Taasina waxay ku Tusin in Cidda Xaq u Yeedhi tahay mid lagu Yaqaan Sharaf iyo Amaano. Al-Mu'minuun (62-70).

71. Hadduu Raaco Xaqu Hawadooda waxaa Fasaadi Lahaa Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa u Dhaxeeya, waxaanse Siinay Quraanka wayse ka Jeedsan quraanka.

وَأَلْوَاتِعُ الْحَقِّ أَهْوَاءَهُمْ لَفَسَدَتِ السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ وَمَنْ فِيهِنَّ بَلْ أَتَيْنَهُمْ بِذِكْرِهِمْ فَهُمْ عَنِ ذِكْرِهِمْ مُعْرِضُونَ ﴿٧١﴾

72. Mise waxaad warsan Kharaj (ujuuro) Ajirka Eebahaabaa Khayr Roon, waana kan u Khayr Badan Arzaaqe.

أَمْ لَسَأَلْتَهُم خَرْجًا فَخَرَجَ رَيْكَ خَيْرٌ وَهُوَ خَيْرَ الرَّزْقِينَ ﴿٧٢﴾

73. Adiguna waxaad ugu Yeedhi Jid Toosan.

وَأَلَيْكَ لَتَدْعُوهُمْ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٧٣﴾

74. Kuwa aan Rumeyn Aakhirona Jidka way ka Iilan.

وَأِنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ عَنِ الصِّرَاطِ لَنُكَرِبُونَ ﴿٧٤﴾

75. Haddaan u Naxariisanno oon ka Faydno waxa haya oo Dhib ah waxay ku Madax Taagi Xumaantooda iyagoo ku Indho la'.

* وَلَوْ رَحِمْنَاهُمْ وَكَشَفْنَا مَا بِهِمْ مِنْ ضُرِّ النَّجْرَانِ طَغَيْنَاهُمْ بِعَمَهُونَ ﴿٧٥﴾

76. Waxaannu ku Qabanay Cadaab umana ayan Hogaansamin «Dulloobin» Eebahood umana Khushuucin.

وَلَقَدْ أَخَذْنَاهُمْ بِالْعُقَابِ فَمَا أَصْبَأُوا لِرَيْبِهِمْ وَمَا يَحْضَرُونَ ﴿٧٦﴾

77. Markaan ku Furro Korkooda Cadaab Daran markaasay Quustaan.

حَتَّىٰ إِذَا فَتَنَّا عَلَيْهِمْ آبَاءَ عَادٍ شَدِيدًا إِذَاهُمْ فِيهِ مَبْلِسُونَ ﴿٧٧﴾

Socon Jidka Toosan ee Habboon, haddii kale waxaa Fasaadi Cirka, Dhulka iyo waxa ku Dhex sugan, Wuxuuna Eebe soo Dejiyey Quraan Sharaf leh oy Gaaladuna ka Jeedsan, Nabiguna wax Ujuura ah ma warsado, Illeen Ajriga Eebaa Khayr Roone, wuxuuse Nabigu ugu Yeedhi Jidka Toosan, kuwaan Rumayn Aakhirana Jidka way ka Leexdaan, hadduu Eebe u Naxariisto oo ka Faydo Dhibna waxay ku Sii Madax Taagaan Xumaanta, Eebana wuu Imtixaamaa mase u Khushuucan inta ay ka Arkaan Albaab Cadaab Daran oy Markaas Quustaan, Saasuuna Quraanku iyo Nabigu ugu Yeedhi Xaqa iyo Jidhka Toosan, Dadka Qaarkiina u Diidi. siduu Nabigu Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Xadiith Macnihiisu yahay: Waxaan Idin hayaa Guntiga oo Dabka Idin ka Celin, Idinkuna isku Tuuraysaan waxayna u Dhawdahay inaan idin sii Daayo, waxaana layga Celin, Doonaa Da markaan Dhaho Eebow waa umadayda yaa la Dhihi ma Ogid waxay Sameeyeen Gadaashaa, Dib bay U noqdeen, (Gaaloobeen) waana taas Dib u noqoshada Dhabta ah. Al-Mu'minuum (71-77).

78. Eebe waa kan idiin Yeelay Maqalka, iyo Araga iyo Quluubta wax Yar baadna ku Shugriyeysaan (Eebe).

وَهُوَ الَّذِي أَنْشَأَكُمْ السَّمْعَ وَالْأَبْصَرَ وَالْأَفْئِدَةَ
قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ﴿٧٨﴾

79. Eebe waa Kan idinka Abuuray Dhulka Xagiisaana laydiin soo Celinaa.

وَهُوَ الَّذِي ذَرَأَكُمْ فِي الْأَرْضِ وَإِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٧٩﴾

80. Eebe waa Kan wax Nooleeya, waxna Dila wuxuuna Leeyahay Iskhi-laafka (Kala Duwanaanta) Habeenka iyo Maalinta ee Miyeydaan Wax ka-sayn.

وَهُوَ الَّذِي يُحْيِي وَيُمِيتُ وَلَهُ اخْتَلَفَ اللَّيْلُ وَالنَّهَارُ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٨٠﴾

81. waxayse Dheheen wax la mid ah waxay Dhaheen kuwii hore (Gaaladii).

بَلْ قَالُوا مِثْلَ مَا قَالَ الْأَوَّلُونَ ﴿٨١﴾

82. waxay Dheheen Ma Markaan Dhi-manno oon Noqonno Carro iyo Lafo Miyaa Anaga nala soo Bixin.

قَالُوا إِنْ دَامَتْ سَاوَاتُكُمُ النَّارُ نَبَا وَعِظْلَمَا إِيَّانَا
لَسَمِعُوهُنَّ ﴿٨٢﴾

83. Waa Naloo Yaboohay Aabayaal-kanno kan (Soo Bixinta) horay manna ah kani waxaan warkii hore ahayn.

لَقَدْ وَعَدْنَا لَكُمُ النَّارَ وَإِنَّا لَمُتَّبِعُونَ ﴿٨٣﴾
إِلَّا الْأَنْبِيَاءَ الْأَوَّلِينَ ﴿٨٣﴾

84. Waxaad Dhahdaa yaa leh Dhulka iyo waxa ku sugan haddad wax Ogtihiin.

قُلْ لَسَنُ الْأَرْضِ وَمَنْ فِيهَا إِن كُنْتُمْ
تَعْلَمُونَ ﴿٨٤﴾

85. waxay Odhan Eebe, waxaad Dhahdaa Miyeydaan wax Xusuusanayn.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ قُلْ أَفَلَا تَدْعُونَ ﴿٨٥﴾

86. Dheh waayo Eebaha Samooyinka Todobada ah iyo Eebaha Carshiga Wayn.

قُلْ مَنْ رَبُّ السَّمَوَاتِ السَّبْعِ وَرَبُّ الْعَرْشِ
الْعَظِيمِ ﴿٨٦﴾

87. waxay Odhan Eebe, Dheh Miyeydaan Dhawrsanayn.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ قُلْ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٨٧﴾

88. Dheh Yey yaddiisa* ku Jirtaa Xukunka wax kasta, oo wax Magan Galiya, isna aan wax laga Magan galinayn, Haddaad wax Ogtihiin.

قُلْ مَنْ يَدِينُ مَلَائِكَةُ كُلِّ شَيْءٍ وَهُوَ يُحْيِي
وَلَا يُجَارِعُ عَلَيْهِ إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٨٨﴾

89. waxay Odhan Eebe, Dheh Xaggee Laydiin Sixri.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ قُلْ فَأَنَّى تُشْرِكُونَ ﴿٨٩﴾

90. Waxaanse Siinay Xaq waana Beenaalayaal.

بَلْ أَتَيْنَاهُم بِالْحَقِّ وَإِنَّهُمْ لَكَاذِبُونَ ﴿٩٠﴾

Eebaa Dadka ugu Nicmeeyey Maqalka, Aragga, Caqliga iyo Nicmooyinka kale si ay ugu Mahdiyaan, wanaagana ugu Dhaqmaan, Isagaana Abuura, oo Dila oo Noolayn, wax walbana Awoodiisa ku Jiraa, Dadkana soo Kulmin, Xukunka Dhulka, Cirka, Carshiga, wax kasta iyo Magan Galintaba isagaa leh, wax Dhibi ama wax u Tara ama Magan galinna ma Jiro, Sidaasayna Waajib u Tahay in si Dhab ah loo Caabudo looguna Dhaqmo Sharciyiisa iyo quraankiisa. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Xaalka Eebe waa ka wayn yahay Sidaas, Carshigiisu wuxuu ku Yahay Sidaas, wuxuu Ishaaray Gacantiisa sida Qubad. Al-Mu'minuun (78-90).

* gacantiisa (dib u eegaha).

91. Ma yeelan Eebe Ilmo, mana aha Miciisa Ilaah (kale) Illeen markaas wuu la Tagi lahaa Ilaah walba wuxuu Abuuray, wuxuuna ka Kormari lahaa (Adkaan lahaa) Qaarkood Qaar, waxaa ka Nasahan Eebe waxay ku Tilmaami.

مَا اتَّخَذَ اللَّهُ مِنْ وَلَدٍ وَمَا كَانَ مَعَهُ مِنْ إِلَهٍ إِذًا
لَذَهَبَ كُلُّ إِلَهٍ بِمَا خَلَقَ وَلَعَلَّ بَعْضُهُمْ عَلَى
بَعْضٍ سُبْحَانَ اللَّهِ عَمَّا يُصِفُونَ ﴿٩١﴾

92. Waa Ogaha waxa Maqan iyo waxa Jooga, wuuna ka Sarreeyaa waxay la Wadaajin.

عَلِيمُ الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَتَعَالَى عَمَّا
يُشْرِكُونَ ﴿٩٢﴾

93. Waxaad Dhahdaa Eebow Haddaad i Tusiso waxa Looyaboohay.

قُلْ رَبِّ إِنَّمَا رَغِبْتُ إِلَىٰ مَا يُوعَدُونَ ﴿٩٣﴾

94. Eebow hayga Yeelin Qoomka Daalimiinta ah.

رَبِّ فَلَا يَجْعَلُنِي فِي الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٩٤﴾

95. Annaguna inaan ku Tusinno waaxaan u Yaboohnay waan Karraa.

وَإِنَّا عَلَىٰ أَنْ نُثْرِكَ مَا وَعَدْتَهُمْ لَقَدِيرُونَ ﴿٩٥﴾

96. ee Raaci (Dhaafso) Tan Wanaagsan Midda Xun Anagaa og waxay Tilmaamiye (Sheegi).

أَذْفَعُ بِاللَّيْلِ هِيَ أَحْسَنُ السَّيِّئَةِ نَحْنُ أَعْلَمُ بِمَا
يَصِفُونَ ﴿٩٦﴾

97. Waxaadna Dhahdaa Eebow waxaan kaa Magangalay Waswaaska Shayaa-diinta.

قُلْ رَبِّ أَعُوذُ بِكَ مِنْ هَمَزَاتِ الشَّيَاطِينِ ﴿٩٧﴾

98. waxaana kaa Magan Gali Eebow inay ii Yimaadaan Shayaadiintu.

وَأَعُوذُ بِكَ رَبِّ أَنْ يَحْضُرُونِ ﴿٩٨﴾

99. Markuu u Yimaaddo Midkood (Gaalada) Mawdku wuxuu Dhihi Eebow I celiya.

حَتَّىٰ إِذَا جَاءَ أَحَدَهُمُ الْمَوْتُ قَالَ

رَبِّ آتِنِي حَقِّي ﴿٩٩﴾

100. Waxaan u Dhawahay inaan Faloo Wanaage waxaan ka Tagay, saas ma aha ee waa Hadal uu iska Yidhi Gadaashoodana waxaa ah Barzakh, tan iyo Maalinta la Soo Bixin.

لَعَلِّي أَعْمَلُ صَالِحًا فِيمَا تَرَكْتُ كَلَّا إِنَّهَا

كَلِمَةٌ هُوَ قَائِلُهَا وَمِنْ وَرَائِهِمْ بَرْزَخٌ إِلَىٰ يَوْمِ

يُبْعَثُونَ ﴿١٠٠﴾

Eebe Ilmo ma leh Umana Baahna, Ilaah kalena lama Jiro oo Mid Walba wuxuu Qaadan lahaa wuxuu Abuuray, Midbaana midka kale ka Sarreyn lahaa, waana ka Nazahanyahay Eebe waxaas, wax walbana waa Ogyahay, Eebana waa karaa Ciqaabtooda, waana in Eebe la Warsado inuusan Daalimiinta kala mid Dhigin Siduu Nabiga Faray, Xumaantana waa in Wanaag Lagu Badalaa, Shaydaankana Eebe laga Magan Galo, si aan marka la Dhiman Loo Calaa Calin Celinna loo Warsanin si Camal Fiican loo Faloo. Al-Mu'minuum (91-100).

101. Marka la Afufo Suurka ma Jiro Nasab Dhexdooda Maalintaas, waxna isma Warsadaan.

فَإِذَا نُفِخَ فِي الصُّورِ فَلَا أَنْسَابَ بَيْنَهُمْ يَوْمَئِذٍ

وَلَا يَتَسَاءَلُونَ ﴿١٠١﴾

102. Ciddayse Cuslaato Miisaankiisu (Wanaagga) kuwaasi waa kuwa uun Liibaanay.

فَمَنْ تَقَلَّتْ مُوزَنُهُ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿١٠٢﴾

103. Ciddayse Fududaato Miisaankiisu kuwaasi waa kuwa Khasariyey Naf-tooda Jahannamayna ku Waari.

وَمَنْ حَقَّتْ مُوزَنُهُ فَأُولَٰئِكَ الَّذِينَ خَسِرُوا

أَنفُسَهُمْ فِي جَهَنَّمَ خَالِدِينَ ﴿١٠٣﴾

104. waxaana Gubi Wajigooda Naarta iyagoo Waji diiran.

تَلْفَحُ وُجُوهَهُمُ النَّارُ وَهُمْ فِيهَا كَالِحُونَ ﴿١٠٤﴾

105. (Waxaa lagu Dhihi) Miyeyna ahayn Ayaadkanagu kuwa lagu Akh-riyo Korkiinna ood Beenin Jirteen.

أَلَمْ تَرَ كُنَّا لَكُمْ فِتْنَةً فَكَثُرْتُمْ فِيهَا

تُكْذِبُونَ ﴿١٠٥﴾

106. waxay Dhahaan Eebow waxaa naga Adkaatay Xumaantanadii, waxaan ahayn Qaar Dhunsan.

قَالُوا رَبَّنَا عَلَّمْتَنَا مَا لَمْ نَكُنَّا نَعْلَمُ وَأَنْتَ أَعْلَمُ

بِالْغَيْبِ ﴿١٠٦﴾

107. Eebow naga Bixi Xaggeeda Haddaan u Noqonana Anagaa Daalimiin ah.

رَبَّنَا أَخْرِجْنَا مِنْهَا فَإِنْ عُدْنَا فَإِنَّا ظَالِمُونَ ﴿١٠٧﴾

108. Wuxuu Dhahaa Eebe ku Fogaada

قَالَ اخْسَوْا فِيهَا وَلَا تُكَلِّمُونِ ﴿١٠٨﴾

Dhexdeeda Idinkoo (Dullaysan) hana Ila Hadlina.

109. Waxaa Jirtay in Koox ka mid ah Addoomadayda ay Dhahaan Eebow waan Rumaynay Xaqa ee noo Dhaaf noona Naxariiso Adaa Naxariiste u Khayr Roone.

إِنَّهُ كَانَ قَرِيْبًا مِّنْ عِبَادِي يَفْعَلُونَ رَبِّنَا عَمَلًا
فَاعْتَرَفْنَا بِأَرْحَمَتِنَا وَأَنْتَ خَيْرُ الرَّاحِمِينَ ﴿١٠٩﴾

110. Waxaadse ka Yeelateen Jeess jeess intay idinka Halmaansiiyaan Xuskayga ood kuna Qoslayseen.

فَاتَّخَذْتُمُوهُمْ سَعِيرًا حَتَّىٰ آسَوْا فِيكُمْ وَكُنْتُمْ
مِنْهُمْ فَصَحَّحَكُمُوتٌ ﴿١١٠﴾

111. Waan ka Abaal marinay Maanta Samirkoodii Dartiis, iyaga unbaana Liibaanay.

إِنِّي جَزَيْتُهُمُ الْيَوْمَ بِمَا صَبَرُوا إِنَّهُمْ
هُمُ الْقَائِلُونَ ﴿١١١﴾

Qiyaamada, Miisaanka, Janada, Naarta iyo Abaal marintaba wax badan yuu Quraanku soo Cel Celiyey, waxaase loo Baahan yahay Waano Qaadasho.

Waxbana uma Taro Gaalo Calaacal Maalintaa mar Hadday Beenin Jireen Quraanka, kuna Jeess jeess Jireen Mu'miniinta, kuna Qosli Jireen, Kuwaasoo Wanaag lagu Abaal Marin Maalintaas Liibaanina. waxayna Caddayn Aayaddu Inaan Nasab iyo Qaraabo wax tarayn Qiyaamada ee Wanaag iyo Xaq Rumayn uun wax Tari iyo toosni Dhab ah. Al-Mu'Minuun (101-111).

112. Wuxuuna Dhihi Eebe imisa Sanaad ku Nagaateen Dhulka.

قَالَ كَذِبًا إِنَّهُمُ فِي الْأَرْضِ عَدَدَ سِنِينَ ﴿١١٢﴾

113. waxayna Odhan waxaan ku Naaganay Maalin ama Maalin Qaarkeed, warsada kuwa wax tiriya «Malaa'igta».

قَالُوا إِنَّا بِنَاؤُهُمَا أَوْ بَعْضَ يَوْمِ فَسْخَلِ الْعَادِينَ ﴿١١٣﴾

114. Wuxuu Yidhi Maydaan Nagaanin wax Yar Mooyee Haddaad wax Ogtihiin.

قَالَ إِنْ لَيْسَ لَكُمْ إِلَّا قَلِيلٌ لَّا تَوَاتَكُمُ كُنُوزُهُ
تَعْلَمُونَ ﴿١١٤﴾

115. ma waxaad u Malayseen inaan Idiin Abuuray Ciyaar oon idinka Xag-ganaga loo soo Celinayn.

أَفَحَسِبْتُمْ أَنْمَّا خَلَقْنَاكُمْ عَبَثًا وَأَنْكُمْ
إِنَّا لَأَنْرَجِعُكُمْ ﴿١١٥﴾

116. Waxaa Sarreeya Eebaha Xaakim-ka Xaqa ah, macbuud xaqa oo aan isaga ahayna ma jiro waana Eebaha Carshiga Sharafta leh.

فَتَعَالَىٰ اللَّهُ الْمَلِكُ الْحَقُّ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ رَبُّ
الْعَرْشِ الْعَظِيمِ ﴿١١٦﴾


117. Ciddii Caabudda Eebe la Jirkiisa Ilaah kale oon Xujo lahayn Xisaabtiisu waa uun Eebe Agtiisa, mana Liibaanto Gaalo.

وَمَنْ يَدْعُ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ لَا بُرْهَانَ لَهُ بِهِ
فَأِنَّمَا حِسَابُهُ عِنْدَ رَبِّهِ إِنَّهُ لَا يُفْلِحُ
الْكَافِرُونَ ﴿١١٧﴾

118. Waxad Dhahdaa Eebow Dhaaf oo Naxariiso adaa Naxariiste u Khayr Roone.

وَقُلْ رَبِّ اعْفِرْ وَارْحَمْ وَأَنْتَ خَيْرُ الرَّحِيمِينَ ﴿١١٨﴾

Gaalada Xisaabtu way ka Lumi Qiyaamada, mana Gartaan intay Adduunka ku Noolaayeen, waxayse Sheegi inay Maalin ama Maalin Badhkeed ku Noolaayeen Iyagooy la Yaraatay dhibka Dartiis, Wax yar bayse ku Noolaayeen hadday Garan, Dadkana Ciyaar looma Abuurin, waxaana Sarreeya Eebaha Xaakimka Xaqa ah, ee Carshiga Sharafta leh iska leh, Ciddii Caabuda oo Xumaan iyo Gaalimo ku Raacda wax kale Eebe la Jirkiisa Eebaa Xisaabin, Gaalana ma Liibaanaan, Dambi Dhaaf iyo Naxariisna Eebaa leh oo hanta. Al-Mu'minuum (112-118).



Suurat An-Nuur

سُورَةُ النُّورِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Tani) waa Suurad aan Soo Dejinay oo Faralnay (wax ku Caddaynay) kuna soo Dejinay Dhexdeeda Aayaad Cad Cad inaad wax Xusuusataan (waano qaada Taan).

سُورَةٌ أَنْزَلْنَاهَا وَقَرَّضْنَاهَا وَأَنْزَلْنَا فِيهَا آيَاتٍ بَيِّنَاتٍ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿١﴾

2. Zaanayadda (Haween) iyo Zaaniga (Ragga) Garaaca mid kastoo ka mid ah Boqol Garaac yeyna Idiin Qabanin Xagooda Naxariis Diinta Eebe Dhexdeeda Haddaad Tihiin kuwa Rumeeyey Eebe iyo Maalinta Dambe (Qiyaamada) hana Joogo Garaacooda Koox ka Mid ah Mu'miniinta.

الزَّانِيَةُ وَالزَّانِي فَاجْلِدُوا كُلَّ وَاحِدٍ مِّنْهُمَا مِائَةَ جَلْدَةٍ وَلَا تَأْخُذْكُمْ بِهِمَا رَأْفَةٌ فِي دِينِ اللَّهِ إِنْ كُنْتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَلَيْشَهِدَ عِدَاهُمَا طَائِفَةٌ مِّنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٢﴾

3. Zaani ma Guursado waxaan Zaanayad ahayn ama Gaal, Zaanayadna ma Guursato waxaan Zaani ahayn ama Gaal, waana laga Reebay Arrintaas Mu'miniinta.

الزَّانِي لَا يَنْكِحُ إِلَّا زَانِيَةً أَوْ مُشْرِكَةً وَالزَّانِيَةُ لَا يَنْكِحُهَا إِلَّا زَانٍ أَوْ مُشْرِكٌ وَحُرْمَتُ ذَلِكَ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ ﴿٣﴾

4. Kuwa (Zino) ku Gana (Sheega) Haweenka Dhawrsoon oon Afar Marag ah keenin Garaaca Siddeetan Garaacood, hana ka Aqbalina Marag Wali-good, kuwaasina waa uun Faasiqiin.

وَالَّذِينَ يَرْمُونَ الْمُحْصَنَاتِ فَزُولُوا بَأْسَ بَعْثَةِ شُهَدَاءَ فَاجْلِدُوهُمْ ثَمَانِينَ جَلْدَةً وَلَا تَقْبَلُوا لَهُنَّ شَهَادَةً أَبَدًا وَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴿٤﴾

5. Marka laga Reebo kuwa Toobad Keena intaas ka Dib oo Wanaajiya, Eebana wa (Dambi) Dhaafe Naxariista.

إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا مِن بَعْدِ ذَلِكَ وَأَصْلَحُوا فَإِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥﴾

Suuraddan waa Suurad wayn, wax badanna ka waranta Aadaabta Islaamka, oyna Haboontahay in la Fahmo, waxayna ku Billaabatay in Eebe soo Dejiyey kuna Cadeeyay Aayaad, waxaa ku Xiga Ciddii Zino la Timaadda Rag iyo Haweenba oon horay wax u Guursan in lala Dhaco Boqol Ulood, oon loona Nixin, Maragna loo Yeelo, iyo in Dadka Xun Xun Iyagu isku Haboonyihiin oo Zaani iyo Gaal uu Guursan mid la Mid ah, lagana Reebay Mu'miniinta, Gaalada Kitaabka leh waa laga Hadlay Wayna Bannaanyihiin gurka Haweenkoodu, Tan kale Ciddii Qadafta Ruux Dhawrsoon kuna Sheegta Zino

Afar Marag la'aan waa In lala Dhaco Siddeetan Ulood, lagana Aqbalin Marag Waligiis, Ciddii Toobad keenta oo Wanaagsanaata Mooyee, waxayna ku Tusin Xumida Zinada, Dhawrida Sharafta Muslimka iyo Wanaagga Diinta Islaamka. An-Nuur (1-5g).

6. Kuwa Qadfa (Zino ku Sheega) Haweenkooda oon Marag aan Naftooda Ahayn Lahayn midkood Maraggiisu waa inuu ku Marag Kaco Dhaarta Afar Dhaarood Eebe inuu Run Sheegi.

وَالَّذِينَ يَرْمُونَ أَزْوَاجَهُمْ وَلَمْ يَكُن لَّهُمْ شُهَدَاءُ إِلَّا أَنفُسُهُمْ فَشَهَدُوا أَنَّهُمْ كَذِبٌ إِنَّهُمْ لَيَكْفُرُونَ إِلَّا أَن يَأْتِيَهُمُ اللَّهُ بِذِكْرٍ لَّيِّنٍ مِنَ الْغَيْبِ فَقَدْ أُنزِلَتْ آيَاتُ الْكُرْآنِ وَالصِّدْقِ ٦

7. Tan Shanaad waa inuu ku Dhaarto in Lacanadda Eebe ku Dhacdo hadduu Beenaale yahay.

وَالْحَيْسَةَ أَنْ لَعْنَتَ اللَّهِ عَلَيْهِ إِنْ كَانَ مِنَ الْكَاذِبِينَ ٧

8. Waxaa Ka rida Iyadana Cigaabta inay ku Dhaarato Afar Dhaarood inuu Beenaale yahay.

وَيَذَرُهَا الْعَدَابُ إِنْ شَهِدَ أَرْبَعُ شَهَدَاتٍ بِاللَّهِ إِنَّهُ لَيَكْفُرُ ٨

9. Tan Shanaadna waxay ku Dhaaran in Cadhada Eebe ku Dhacdo hadduu Run Sheegi.

وَالْحَيْسَةَ أَنْ عَضَبَ اللَّهُ عَلَيْهِ إِنْ كَانَ مِنَ الصَّادِقِينَ ٩

10. Hadduuna Jirin Fadliga Eebe iyo Naxariistiisa Korkiinna oosan ahayn Toobad Aqbal Badane Falsan «Waxaa Beenaalaha ku Dhici lahaa Cadaab Daran».

وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُ، وَأَنَّ اللَّهَ تَوَّابٌ حَكِيمٌ ١٥

Sidoo kale Ninkii Haweenaydiisa Zino ku Sheega waxaa Garaacidda ka Reebi inuu shan Goor Eebe ku Dhaarto inuu Run Sheegi, iyana waxay Dhaaran Shan jeer inuu Been Sheegi, ka dibna way kala Furmi, waxaana loo Yaqaanaa Licaan. Diinta Islaamkuna waa diin Sharaf iyo Naxariis, Doonina mayso inay Cidaan wax ku Caddayn Ceebayso, hase yeeshee uma Dul Qaadato waxa Sharafta Dhaawaca, sida ku Sheegga Zinada iyo wax la Mid ah, Mase Fududa in Dadka lagu Sheego waxaan jirin oon Caddayn, waxaa Xadiith ku sugnaatay: Seddex Eebaa ka Xarrimay Jannada, Midka Khayaamada Sameeya, Kan Caasiya Waalidka, iyo kan Ehelkiisa ku Suga Xumaanta. Tan kale ma Banaana in Been lagu Dhaarto, waxayna ka mid tahay waxyaalaha Dadka Naarta Galiya, Saas darteed Zino Hawdhawaan, Cidna Zino ha ku Sheegin Adoon Hubin, Dhabtana Indhaha ka Qabsan, Xuduuda Diinta iyo Islaamka Ilaali, Wanaaga ku Dadaal, Xumaana ka Dadaal. An-Nuur (6-10).

11. Kuwa la Yimid Been Abuurka (Qadafka Caasho) waa Koox Idinka mid ah, How Malaynina inay Shar Idiin tahay, waxayse idiin tahay Khayr, Qof kasta oo ka Mid ahna waxaa u Sugnaaday wuxuu kasban oo Dambi ah midka Qaatay Waynanka Arintana oo ka mid

إِنَّ الَّذِينَ جَاءُوا بِالْإِفْكِ عُصْبَةٌ مِّنْكُمْ لَا تَحْسَبُوهُ شَرًّا لَّكُم بَلْ هُوَ شَرٌّ لَّكُمْ لِكُلِّ آفْرَةٍ مِنْهُمْ مَا اكْتَسَبَ مِنَ الْإِثْمِ وَالَّذِي تَوَلَّى كِبْرَهُ مِنْهُمْ لَهُ عَذَابٌ عَظِيمٌ ١١

ah wuxuu Mudan Cadaab weyn (Ibnu Salool).

12. Maxaydaan Markaad Maqasheen Xaalka (Qadafka) ayna ugu malayn Mu'miniinta ragga iyo Haween Naftooda Khayr, oyna u Dhihin Kaasi waa Been Abuur Cad.

لَوْلَا إِذْ سَمِعْتُمُوهُ ظَنَّ الْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بِأَنفُسِهِنَّ
خَيْرًا وَقَالُوا هَذَا إِفْكٌ مُّبِينٌ ﴿١٢﴾

13. Mayse u Keenaan Korkiisa Afar Marag, Haddayna keenin Marag ku-waasu Eebe Agtiisa waxay ku Yihiin Beenaalayaal.

لَوْلَا جَاءَهُ وَعَلَيْهِ بِأَن بَعَثَ اللَّهُ نَبِيًّا قَدْ آتَىٰ بِآيَاتٍ
بِالشَّهَادَةِ فَأُولَٰئِكَ عِنْدَ اللَّهِ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴿١٣﴾

14. Hdduuse Jirin Fadliga Eebe ee Korkiinna iyo Naxariistiisa Adduun iyo Aakhiraba waxaa Idin Taaban lahaa waxaad Dhexgasheen Dartiis Cadaab weyn.

وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْنَا وَرَحْمَتُهُ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ
لَمَسَّكُمْ فِي مَا أَفَضْتُمْ فِيهِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٤﴾

15. Markaad kula kulmaysaan Qadafka Carrabkiinna oo ku Dhahaysaan Afkiinna waxaydaan Ogayn, una Malaynaysaan wax Fudud Isagoo Eebe Agtiisa ku wayn.

إِذْ تَلَقَّوهُ بِاللَّيْسَةِ كَمَا يَتْلُونَ يَا قَاهِ كَمَا مَالَيْسَ لَكُمْ
بِهِ عِلْمٌ وَتَحْسَبُونَهُ هَيِّنًا وَهُوَ عِنْدَ اللَّهِ عَظِيمٌ ﴿١٥﴾

Aayadahan waxay soo Degeen markay Munaafiqiintu Isku Dayeen inay Dhaawacaan Sharafta Sayido Caa'isha Bintu Abii Bakar, ahaydna Haweeneydii Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yecele) waxaana Arrintaas Hogaaminayay Munaafiqii Waynaa Cabdullaahi Binu Ubayy Binu Salool, Haseyeeshee wuu ku Khasaaray Adduun iyo Aakhiraba, Eebaana ku soo Dejiyey Quraan ka Bari yeeli Caa'isha waxaa soo kale, Mu'miniintana fari inay ka Fogaadaan Maqalka Beentaas oo kale, Wanaagana ku Dadaalaan, An-Nuur (11-15).

16. Markaad Maqasheen Maad Dhahdaan Nooma Habboona Inaan ku Haddallo kan, Eebaa Nasahan ee kan (Qadafka) waa Been Abuur wayn.

وَلَوْلَا إِذْ سَمِعْتُمُوهُ قُلْتُمْ مَا يَكُونُ لَنَا أَنْ نَتَكَلَّمَ بِهَذَا
سُبْحَانَكَ هَذَا بُهْتَانٌ عَظِيمٌ ﴿١٦﴾

17. wuu idinka Waanin Eebe inaad u Noqotaan Isagoo kale Waligeed Haddaad Tihiin Mu'miniin.

يَعِظُكُمْ اللَّهُ أَنْ تَعُودُوا لِمِثْلِهِ أَبَدًا إِنْ كُنْتُمْ
مُؤْمِنِينَ ﴿١٧﴾

18. Wuxuuna idiin Caddayn Eebe Aayaadkiisa, Eebana waa Oge Falsan.

وَيَسِّرْ لَكُمْ الْأَسْبَابَ وَاللَّهُ عَلَيْهِ حَكِيمٌ ﴿١٨﴾

19. Kuwa Jecel inay ku Faafto Xuumaantu Kuwa Rumeeyey (Xaqa) waxaa

إِنَّ الَّذِينَ يُحِبُّونَ أَنْ تَشِيعَ الْفِتْنَةُ فِي الَّذِينَ

u Sugnaaday Cadaab daran Adduun iyo Aakhiraba, Eebena waa Ogyahay idinkuna ma Ogidin.

20. Hadduuna jirin Fadliga Eebe ee Korkiina iyo Naxariistiisa iyo in Eebe yahay Naxariis badane Ilaaliya, (Waxaa ahaan lahaa wax kale).

21. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Raacina Tallaabooyinka (camalka) Shaydaanka Ciddii Raacada Tallaabooyinka Shaydaanka Isagu wuxuu Faraa Xumaanta iyo waxa la Naco, Hadduusan jirin Fadliga Eebe ee Korkiinna iyo Naxariistiisa ma Daahirineen Ruux idinka Mid ah Waligeed, Laakiin Eebaa Daahiriya Cidduu Doono, Eebana waa Maqle Og.

Kuma Haboona Mu'miniintu inay Waxaa soo kale ku Hadhaan, ee waa inay Dhahaan Eebaa Nasahane waa been Abuurasho Wayn, waana inay Qaataan waanada Eebe. Tan kale kuwa Jecel inay Xumaantu ku Faafto Mu'miniinta waa kuwo Ciqaab Mudan Adduun iyo Aakhiraba, waana in Laga Fogaado lagana Digtoonaaod Shaydaan iyo Jidkiisa, Illeen Xumaan umbuu Fariye. Caalamkuna wuxuu ku Dhisanyahay Fadliga Eebe iyo Naxariistiisa Cid Wanaagsanaana ma jiro Naxariista Eebe la'aanteed. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Ruuxu Wuxuu ku Hadlaa Kalimo Cadho Eebe ah oosan Ogayn intay Gaadhi Uguna Hooban Naarta Darteed wax ka Fog Cirka iyo Dhulka Dhexdooda. (Waa Saxiix). An-Nuur (16-21).

22. Yeyna ku Dhaaranin kuwa Fadliga (Dheeraadka) leh iyo Hodanimada inayan wax siinayn Qaraabada, Masakiinta iyo kuwa ku Hijrooda Jidka Eebe, hana iska Cafiyaan hana Saama-xeen, miyeydaan Jeclayn inuu idiin Dhaafo Eebe, Ilaahayna waa Dhaafe Naxariista.

23. Kuwa Gana «Qadfa» Haweenka Dhawrsoon ee Halmaansan (Xumaanta) ee Mu'minaadka ah waa La Lacnaday Adduun iyo Aakhiraba, waxayna Mudan Cadaab Weyn.

24. Maalinta Ay ku Marag-kici Carraboodu, Gacmahoodu, iyo Lugahoodu waxay Camalfaleen.

ءَامِنُوا لَهُمْ عَذَابَ أَلِيمٍ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿١٦﴾

وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُ وَأَنَّ اللَّهَ زَوَّاقٌ لَّحَيِّمٌ ﴿١٧﴾

* يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَتَّبِعُوا خُطُوبَاتِ الشَّيْطَانِ وَمَنْ يَتَّبِعْ خُطُوبَاتِ الشَّيْطَانِ فَإِنَّهُ يَأْمُرُ بِالْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُ وَمَا زَكَّيْنَاكُمْ مِنْ أَحَدٍ أَبَدًا وَلَكِنَّ اللَّهَ يُزَكِّي مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٨﴾

وَلَا يَأْتِلْ أُولُو الْفَضْلِ مِنْكُمْ وَالسَّعَةِ أَنْ يُؤْتُوا أُولِي الْقُرْبَىٰ وَالْمَسْكِينِ وَالْمُهَاجِرِينَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلْيَعْلَمُوا وَلِيَصْغَحُوا الْآخِثُونَ أَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٩﴾

إِنَّ الَّذِينَ يَرْمُونَ الْمُحْصَنَاتِ الْفَاضِلَاتِ الْمُؤْمِنَاتِ لَعُنُوا فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٢٠﴾

يَوْمَ تَشْهَدُ عَلَيْهِمْ أَلْسِنُهُمْ وَأَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُمْ بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٢١﴾

25. Maalintaas wuxuu u oofin Eebe Abaal Marintooda Sugan, waxayna Ogaan in Eebe Yahay Xaqa Cad (Sugan).

يَوْمَ يُؤْمِرُ اللَّهُ بِرَبِّهِمْ الْحَقَّ وَيَعْلَمُونَ أَنَّ اللَّهَ هُوَ الْحَقُّ الْمُبِينُ ﴿٢٥﴾

26. Haweenka iyo Hadalka Xunba wuxuu u Sugnaaday Nimanka Xun, kuwa Xunna waxay u sugnaadeen kuwa Xun, Kuwa Wanaagsanna waxay u sugnaadeen Kuwa Wanaagsan, kuwaasna (Caa'isha iyo Ehelkeedu) waa ka Bari (Dheeryihiin) waxay Sheegi, waxayna Mudan Dambi Dhaaf iyo Rizqi Sharaf leh (Janno).

الْحَيْثُ بَدَأْتَ الْحَيَاتِ وَالْحَيْثُ بَدَأْتَ الْحَيَاتِ وَالطَّيِّبَاتِ وَالطَّيِّبَاتِ وَالطَّيِّبَاتِ أُولَئِكَ مَبْرُورٌ وَمَا يَقُولُونَ لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٢٦﴾

Waxaa Jiray Nin Sayid Abuu Bakar Qaraabo u ahaa lana Noolaa oo wax yar ku Hadlay Arinti Caa'isha, Markaas Abuu Bakar Eryay kana Joojiyey Kaalmadii, Markaas Eebe ku Yar Canaantay Abuu Bakar Xalkaas, markaas uu soo Celiyey. Aayadaha kalana waxay ka Warrami in Haweenka Sharafta leh ee Dhawrsoon ee Xaqa Raacay kuwa Ceebeeya ay la Kulmi Lacnad iyo Cadaab wayn Aakhiro iyo Adduunba oy kuna Marag furi Xubnahoodu Lana Abaal Marin ayna Ogaan in Eebe Xaq Sugan Yahay, Illeen Xumaan Waxaa Muta kuwa Xun, Samaanna Waxaa Muta Kuwa Fiican.

Caa'ishana waa ka Bari Kana Fog waxay ku Sheegeen, waxayna Mudan kuwaas la Dhibay Dambi Dhaaf iyo Janno, Saasuuna Eebe ugu Bari yeelay Caa'isha Aayadahan, Ciqaabna ugu Xukumay Munaafiqiintii ka Qayb Gashay Arrintaas, Taasina waxay Muujin in Eebe u Gargaari Addoomadiisa Dhawrsoon ee suubban. An-Nuur (22-26).

27. Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Galina Guryo aan Kuwiinna ahayn Intaad ka Idam Warsataan kana Salaantaan Ehelkooda, Saasaana idiin Khayr Roon si aad u Xusuusataan.

بَنَاتِهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَدْخُلْنَ عَلَيْهِنَّ حَتَّىٰ تَسْتَأْذِنُوا وَتُسَلِّمُوا عَلَىٰ أَهْلِهَا ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿٢٧﴾

28. Haddaydaan ka Helin Dhexdeeda Ruuxna ha Galina inta Laydinka Idmi, Haddii laydin dhaha Noqdana Noqda, Saasaa idiin Wanaagsan, Eebana Waxaad Falaysaan wuu Ogyahay.

فَإِنْ لَمْ تَجِدُوا فِيهَا أَحَدًا فَلَا تَدْخُلُوهَا حَتَّىٰ يُؤْذَنَ لَكُمْ وَإِنْ قِيلَ لَكُمْ تَرْتَجِعُوا فَارْجِعُوا هُوَ أَزْكىٰ لَكُمْ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ عَلِيمٌ ﴿٢٨﴾

29. Ma aha Korkiinna Dhib (Dambi) Inaad Gashaan Guryo aan la Deganayn oo Dan (Anfaco) idiinku Jirto, Eebe wuxuu Ogyahay waxaad Muujinaysaan iyo waxaad Qarinaysaan.

لَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَنْ تَدْخُلُوا بُيُوتًا غَيْرَ مَسْكُونَةٍ فِيهَا مَتَاعٌ لَّكُمْ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا تُبْدُونَ وَمَا تَكْتُمُونَ ﴿٢٩﴾

30. Waxaad ku Dhahdaa Mu'miniinta Ha Laabeen Indhahooda (Daymada Reeba) hana ka Dhawreen Furuujtooda

فَلِلْمُؤْمِنِينَ بَعْضُهُمْ مِنْ أَصْدِقِهِمْ وَيَحْتَظِلُونَ فُرُوجَهُمْ ذَٰلِكَ أَزْكىٰ لَهُمْ إِنْ اللَّهُ حَيِّرَ يُرِي مَا

(Zinada) saasaa u Wanaagsan, Ebanu wuu Qyayah waxay Sameyn.

يَصْنَعُونَ ﴿٢٤﴾

Aayadahani waxay ku Tusin Wanaagga iyo Aadaabta Diinta Islaamka, oo ah in la Dhawro Guryaha Dadka, oon Lana Galin Idan iyo Slaan La'aan, Wanaagguna waa saas, Haddaan Dad Joogin Lama Galo intaad Idam ka Hesho, Haddii Noqda laydin Dhahana noqda Saasaa Idiin fiicane, Haddayse Guryuhu Yihiin kuwa aan Dad kale Deganayn ee ah kuwa Dadka u dhexeeya Galidoodu, Dambi kaama saarra Haddad Gashid. Eebana waa Ogyahay waxa La Muujin iyo waxa la Qarinba, wuuna ka Abaal Marin. Waa in Mu'miniintu ka Dhawraan Indhahooda Dayidda Xaaraanta ah, taasoo ah Daymada Haweenkood Daydo, iyo in layska Ilaaliyo Zinada iyo Xumaanta, Illeen Eebe waa Ogyahay waxa Lasamayne. Wataas Sharafta Islaamku iyo Nadaafadiisa iyo Aadaabtiisa, waxaana Meelo Badan ku sugnaaday Xaaraannimada Iska Galidda ama Fiirinta Guryaha Dadka, iyo Daawashada Haweenka, Fiirintooda iyo inay Tahay Leeb Iblis iyo Billowga Xumaanta, Taasina waxay Waran ku Tahay Kuwa iska Gala Guryaha Dadka Idam la'aan iyo Kuwa Iska Daawada Jidhka Haweenka. An-Nuur (27-30).

31. Waxaad ku Dhahdaa (Haweenka) Mu'minaadka ah, (Xaqa Rumeeye) Ha Laabeen Indhahooda hana Dhawreen Farjigooda Muujininna Quruxdooda wax Muuqda Mooye, Hana ku Dadeen Hagoogtooda dhuuntooda, yayna u Muujin Quruxdooda Ragooda Mooyee, iyo Aabayooowgood iyo Ninkooda Aabihiis, iyo Wiilashooda iyo Wiilasha Nimankooda iyo Walaalahood iyo Wiilasha Walaalhood, iyo Wiilasha (Gabdahay) Walaalaha yihiin, iyo Haweenkooda (Muslimka ah) ama waxay Hanato Midigtoodu (Gacantoodu) ama kuwa Raaca een Dan Lahayn (Hawo u Lahayn) oo Ragga ah ama Caruurta aan Fiirsanayn Cawrada Haweenka, Yeyna kuna Garaacin Luga-hooda (Dhulka) in la Ogaado waxay Qarin oo Quruxdooda ah, una Toobad keena (U Noqda) Xagga Eebe Dhammaan Mu'miniineey waxaad u Dhawdihiin Inaad Liibaantaane.

وَقُلْ لِلْمُؤْمِنَاتِ يَعْضَضْنَ مِنْتِ أَبْصَرِهِنَّ
وَيَحْفَظْنَ فُرُوجَهُنَّ وَلَا يُبْدِينَ زِينَتَهُنَّ
إِلَّا مَا ظَهَرَ مِنْهَا وَلَا يَضْرِبْنَ بِحُمُرِهِنَّ عَلَى خُبُورِهِنَّ
وَلَا يُبْدِينَ زِينَتَهُنَّ إِلَّا لِبُعُولَتِهِنَّ أَوْ آبَائِهِنَّ
أَوْ آبَاءِ بُعُولَتِهِنَّ أَوْ أَبْنَاءِ بُعُولَتِهِنَّ
أَوْ إِخْوَانِهِنَّ أَوْ بَنَاتِ إِخْوَانِهِنَّ أَوْ خَالَاتِهِنَّ
أَوْ أَسْبَابَهُنَّ أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُنَّ أَوْ لِلتَّيْبِعِينَ
عَدْرَ أُولِي الْأَرْبَابَةِ مِنَ الرِّجَالِ أَوْ الْوَالِدِ الَّذِي
لَهُ رِظْوَانُهُمْ عَلَى عَوَارِثِ النِّسَاءِ وَلَا يَضْرِبْنَ
بِأَرْجُلِهِنَّ لِيُعْلَمَ مَا يُخْفِينَ مِنْ زِينَتِهِنَّ وَتُوبُوا
إِلَى اللَّهِ جَمِيعًا إِنَّهُ السَّمُوتُ لَعَلَّكُمْ
تَقْلِحُونَ ﴿٣١﴾

Aayaddan waxay soo Degtay Mar Haweenku Iska Soo Galeen Guriga Haweeney la Dhihi Jiray Asma Binti Mirthad iyagoo Banaan Laabta oyna Tidhi Xumaa Sidan, waana Amar Eebe uu Faraayo Haweenka Muslimka ah Inay Falaan si ay uga Soocmaan Siday Jaahilintu Falayeen oo ah Isqaawin iyo Muujinta Jidhka, waxayna Fari Aayadu inay Isdhawraan isna Asturaan Oyna isu Muujinnin Ragga Marka Laga Reebo Kuwa Aayaddu Taxday ee ah Nimanka iyo Qaraabada aan Guursankarin, iyo kuwaan Haweenka Dan ka Lahayn iyo Wiilasha Yar Yar een wax Eegayn iyo Haweenka Muslimka ah,

waxa la Sheegina waa waxa Cawrada iyo Jidhka Hoose ka Soo Hadhay, Illeen Kaasi waa Ceebe. Miyeyse Habboontahay in Lays Qaawiyo oo Lagu Noqdo Jaahiliyadii Hore wax ka Daran, iyadoo Cilmi La Sheegan, Wataas Aadaabta Islaamka, waana inay Is Dhawraan oo Is Ilaaliyaan Mu'miniintu Rag iyo Haweenba, Sharaftooda iyo Indhahooda iyo Jidhkoodana Xafitaan Si ay u Helaan Naxariista Eebe iyo Wanaaggiisa. An-Nuur (31).

32. U Guuriya Xaaslaawaha Idinka Mid ah iyo Kuwa Suuban oo Addoomadiinna ah (Rag iyo Haweenba) hadday Sabool Yihiin wuxuu ka Hodmin Eebe Fadligiisa, Eebana waa Waasac (Fadligiisu) waana Oge.

وَأَنْكِحُوا الْأَيْمَىٰ مِنْكُمْ وَأَصْلِحُوا مِنِّي عِبَادَ كُرْ
وَأَمَّا بَعْضُ مَن يَكُونُ أُمْرًا يُعْهِمُ اللَّهُ مَن
فَضَّلَهُ وَاللَّهُ وَسَّعَ عَلَيْهِ ﴿٣٢﴾

33. Hase Dhawrsadeen Kuwaan Helayn (awood) Guur inta Eebe kaga Hodmin Fadligiisa, kuwa Dooni Inay Isfurtaan oo Hanatay Gacantiinnu Kitaabeeya (Ka Ogolaada) Haddaad ku Ogtihiin Khayr, wax ka Siyana Xoolaha Eebe ee uu Idin Siyey, hana ku Qasbina Gabdhihiinna (aad Hanataan) Zino Hadday Doonaan Dhawrsooni Idinkoo Dooni Sadka Nolosha Adduunyada, Ciddii Qasabta Eebe Qasabkaas ka Dib waa Dambi Dhaafe Naxariista.

وَلَيْسَ تَعَفُّفَ الَّذِينَ لَا يُجِدُونَ كَيْفَ أَحَقُّ يُغْنِيَهُمُ اللَّهُ
مِن فَضْلِهِ وَالَّذِينَ يَبْتَغُونَ الْكِتَابَ مِمَّا مَلَكَتْ
أَيْمَانُكُمْ فَكُلُوا مِنْهُم إِنْ عَلِمْتُمْ فِيهِمْ خَيْرًا وَأُوْمَرُ
مِن مَّالِ اللَّهِ الَّذِي آتَاكُمْ وَلَا تَكْرَهُوا فَتَيَّتْ كَرَىٰ عَلَىٰ
الْبِعَاءِ إِنْ أَرَدْنَ تَحَصُّنًا لِّتَبْتَغُوا عَرَضَ الْحَيَوةِ
الدُّنْيَا وَمَن يُكْرَهْهُنَّ فَإِنَّ اللَّهَ مِن بَعْدِ آكْرِهِنَّ
غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٣٣﴾

34. Waxaan idiin soo Dejinay Ayaad Cad Cad iyo Tusaale Kuwii Tagay ee Idinka Horreeyey iyo waanada kuwa Dhawrsada.

وَلَقَدْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكُمْ آيَاتٍ مُّبِينَاتٍ وَمَثَلًا مِّنَ الَّذِينَ
خَلَوْا مِن قَبْلِكُمْ وَمَوْعِظَةً لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٣٤﴾

Diinta Islaamku waa Diin Naxariis iyo Isu Kaalmayn, sida ka Muuqata Aayaddan Eebe ku Fari In Loo Guuriyo Dadka Guri la'aanta ah Rag iyo Haweenba, lana Kaalmeeyo Dadka Dooni Inay ka hoos baxaan Gacanta iyo inay Is Dhawrto Ciddaan Karin Kharashka Guur inta Eebe ka Decqi, iyo Inaan la Farin Haweenka iyo Gabdhaha Gacantooda ku Hoos jira Xumanan iyo Zino, Isagoo la Dooni dhalanteed Adduun, Eebase waa Dambi Dhaafe Ciddii u Toobad keenta, wuxuuna inoo Soo Dejiyay Ayaad Cad cad iyo Tusaale Dadkii hore iyo waanada Ciddii Dhawrsata Taasina waxay ku Tusin in islaamku yahay Diin Caddaalad, Isu Kaalmayn, Nadaafo, Sharaf iyo Dhawrsooni, Islaamkuna Markuu u Yeedhi in La Xoreeyo Dadka Gacan ku Hoos jira oo ah Ruux Maxaad maleyn Kuwa Gaalada ah ee Addoonsada Dad, Haddana Qaylyi ama Islaamka Xoraynta Fari wax Ka Sheegi, waa Doqomo Indha la', oon Fikirayn, waxaase ka sii Xun kuwa u Durbaantumi Kuwaas.

Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Dhallin yarooy Ciddii Karta Kharash Guurka ha Guursato, Isagaa Isha Laabid badane oo Farjiga Dhawrid Badane, Ciddaan Karinna waxaa Saaran Soon si uu u fududeeyo Himada. inse laga Tago Guurka isagoo la dano Sheegan, haddana wax la qasto oo la Meeraysto Taasi Islaamku ma Ogala mana banaana. An-Nuur (32-34).

35. Eebe waa Hanuuniyaha ehelka Samooyinka iyo Dhulka, Nuurkiisu wuxuu la mid yahay Daaqad Misbaax ku Jiro Misbaaxuna ku Jiro Dhalo, Dhaladana aad Mooddo Xiddig Ifi lagana Huriyey Geed la Barakeeyay oo ah Zaytuun (Saliid leh) oon bari iyo Galbeed midna ahyayn, waxayna u Dhawdahay Saliideedu inay iska Ifto Yuuna Taabaninba Dabe, waa Nuur lagu kordhiyay Nuur, wuxuuna ku Hanuuniyaa Eebe Nuurkiisa Cidduu Doono, wuxuuna u Yeelaa Eebe Dadka Tusaale, Eebana wax kasta waa Ogyahay.

36. (Kaasoo ah) Guryo (Masaajidda) uu idmay Eebe in la Koryeelo Laguna Xuso Dhexdeeda Magaciisa, waxaana ugu Tasbiixsada Dhexdeeda Aroor iyo Galabba.

37. Rag ayna ka Shuqlinayn Ganacsi iyo Gadasho Xuska Eebe, Oogidda Salaadda iyo Bixinta Zakada kana Cabsan Maalin oy Gagadoomi Dhexdeeda Quluubta iyo Aragguba.

38. Inuu ka Abbal Mariyo Eebe Wanaagay Faleen una Kordhiyo Fadligiisa, Eebana wuu Arzuqaa Cidduu Doono Xisaab la'aan.

﴿اللَّهُ نُورُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ مِثْلُ نُورِهِ
كَيْسُكَوْرٍ فِيهَا مِصْبَاحٌ الْيَصْبُحُ فِي رُجَاةٍ
الزُّجَاةِ كَأَنَّهُ كَوْكَبٌ دُرِّيٌّ يُوقَدُ مِنْ شَجَرَةٍ مُبْرَكَةٍ
زَيْتُونَةٍ تَلَوْنَهَا وَيَلَوْنَهَا كَأَنَّهَا بَيْتُ
وَلَوْ تَرَىٰ فَتَأْسَفُ نَارُهُ تَورَعُ عَلَىٰ نُورِهِ اللَّهُ لِنُورِهِ
مَنْ يَشَاءُ وَيَضْرِبُ اللَّهُ الْأَمْثَالَ لِلنَّاسِ وَاللَّهُ بِكُلِّ
شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٢٥﴾﴾

﴿فِي بُيُوتٍ أُذِنَ لِلَّهِ أَنْ تُشْرَقَ فِيهَا
أَسْمُهُ وَيُسَبِّحَ لَهُ فِيهَا بِالْأَعْدُوِّ وَالْأَصْحَابِ ﴿٢٦﴾﴾

﴿رِجَالٌ لَا تُلْهِيهِمْ تِجَارَةٌ وَلَا بَيْعٌ عَنْ ذِكْرِ اللَّهِ
وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ بِحَاوِنٍ مِمَّا تَتَّقَلْبُ
فِيهِ الْقُلُوبُ وَالْأَبْصَارُ ﴿٢٧﴾﴾

﴿لِيَجْزِيََهُمُ اللَّهُ أَحْسَنَ مَا عَمِلُوا وَيَزِيدَهُم مِّنْ
فَضْلِهِ وَاللَّهُ بِرُفْقٍ مِّنْ يَشَاءُ يَعْتَبِرُ حِسَابِ ﴿٢٨﴾﴾

Nuurka Eebe Waynaaye yey la Ifaan Samooyinka iyo dhulka, wuxuuna ku Hanuuniyaa Nuurkaas Cidduu Doono, waana Tusaale Eebe Qadaray. Xadiithna waxaa ku sugnaaday: Waxaan Magan gali Nuurka Wajigaaga oy u Iftay Mogdiyadu (Eebow). Masaajidda Eebe ee uu Idmay in La Sharrifo oo la Koryeelana lagu Xuso Magaciisa Waqti kasta waxaa ku Dadaala Dad ayna ka Shuqlinayn Xusidda Eebe, Salaadda, iyo zakada Gancsi iyo Gadasho Midna, iyagoo ka Cabsan Maalin Qalbiga iyo Aragu Gagadoomi, Qiyaamada, iyagoo Rajayn in Eebe Wanaag ku abaal mariyo, Masaajidda Xaalkooduna waa Waynyahay waana Meelaha Nuurka Islaamku ka Billowday Eebana Ugu Jecelyahay, waana in la Dhiso, Lana Camiro, waxna lagu Barto Cibaadada kale ka Sokow, waxaana ku soo Arooray Fadliga Cidda Dhista ama Camirta ama u Dadaasha Wanaagyo Badan, waxaana ka Mid ah: Ruuxii Dhisa Masaajid Isagoo Dar Eebe u dhisi Wuxuu Eebe Uga Dhisaa Janada Isagoo Kale. Caa'ishana waxay Tidhi: Wuxuu Na faray Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) in Laga Dhiso Masaajidda Xaafadaha lana Nadiifiyo, lana Udgiyo. An-Nuur (35-38).

39. Kuwii Gaaloobay Camalkoodu wuxuu la Midyahay Dhalanteed Dhul Siman (Ka Muuqda) oos u Malayn kan Oomani biyo Markuu Yimaadana uuna ka Helayn waxba, oo uu ka heli Eebe (Abaal marintiisa) Agtiisa una Oofiyey Xisaabtiisa, Eebana way Deg degtaa Xisaabtiisu.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا أَعْمَالُهُمْ كَسَرَابٍ بِقِيَعَةٍ يَخْسَبُهُ
الظَّمْثَانُ مَاءً حَتَّى إِذَا جَاءَهُمْ لَمْ يَجِدْهُ سَائِغًا
وَوَجَدَ اللَّهَ عِنْدَهُ فَوَفَّيْتُهُ حِسَابَهُ وَاللَّهُ سَرِيعُ
الْحِسَابِ ﴿٢٩﴾

40. Ama wuxuu la Midyahay Mugdiyo Bad Dhexdeed ah oos Dabooli Hir Korkiisana yahay Hir, Korkiisana Tahay Daruur, waa Mugdiyo Qaarkood Qaar ka Sarreeyo Hadduu Bixiyo Gacantiisana uma Dhawa inuu Arko, Ruuxxaan Eebe u yeelin Nuur malaha Nuur.

أَوْ كَظُلُمَاتٍ فِي بَحْرٍ لَمَّيٍّ يَغْشَاهُ مَوْجٌ مِنْ فَوْقِهِ مَوْجٌ
مِنْ فَوْقِهِ سَحَابٌ طُلُمَاتٌ بَعْضُهَا فَوْقَ بَعْضٍ
إِذَا أَخْرَجَ يَدَهُ لَمْ يَكَدْ يَرَاهُمْ وَمَنْ لَمْ يَجْعَلِ اللَّهُ
لَهُ نُورًا فَلَمْ يَلَمْهُ مِنْ نُورٍ ﴿٣٠﴾

41. Miyaadan Ogayn in Eebe u Tasbiixsado waxa ku Sugaan Samooyinka iyo Dhulka iyo Shimbiraha oo (Fidsan) Safan mid kasta wuu Ogyahay Salaad-diisa iyo Tasbiixdiisa, Eebana waa Ogyahay waxay Fali.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يَسْخَرُ لَهُ مِنْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ
وَالظُّلُمَاتِ صَفَّتْ كُلُّ قَدَعَةٍ صَلَاتُهُ وَتَسْبِيحُهُ
وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِمَا يَفْعَلُونَ ﴿٣١﴾

42. Eebe waxaa u Sugnaaday Xukunka Samooyinka iyo dhulka Xagga Eebana loo Ahaan.

وَلِلَّهِ مَلَكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَإِلَى اللَّهِ الْمَصِيرُ ﴿٣٢﴾

Markay Aayadaha Hore Ka warrameen Nuurka Eebe iyo Iimaanka iyo Jidka Wanaagga ee uu ku Hanuuniyey Mu'iniinta, iyo Masaajidda, iyo in kuwayna Shuqlinin Adduunyadu ay ku cibaadaystaan Sharifaanna yaa Halkan lagu Sheegay in Camalka Gaaladu la Midyahay Dhalanteed ooman Biyo Mooday meel Cidla ah oo Oomana ah, Markuu Dhintana uu La kulmi Eebe una Oofin Abaalkiisa, Illeen Mugdiyo Baadiyuu ku Sugnaaye, Nuurna Eebe uma yeeline, Eebana Kuwaas waa ka Kaaftoonayahay Illeen waxaa Wayneeya oo Caabuda waxa Cirka iyo dhulka ku Sugaan, Xaataa Shinbiraha Duuli, Hawada Sare, Isagoo Eebe wax walba og, wax walbana Xaggiisa u Ahaan, waxaa Sugnaaday in Yuhuud lagu Dhihi Qiyaamada Maxaad Caabudayscen oy Dhihi, Waxaan Caabudaynay Cuzayr Ibnu Ilaah, markaasaa lagu Dhihi Beenbaad Sheegteen, Eebe Ilmo ma Yeelanin, ee Maxaad Rabtaan, waxayna Odhan Eebow waannu Oonaye ee Na Waraabi Markaasaa la Dhihi Miyeydaan Arkayn, Naartaana ugu Muuqata Dhalanteed oo Qaarkood Qaar Buuran Markaasay Isku Tuurayaan. Eebaan ka Magan galay, Halkaasayna Jiraan Liibaan iyo Khasaare, Liibaanta Mu'iniinta iyo Khasaaraha Gaalada, waana Arrin Mudan u Darbasha. An-Nuur (39-42).

43. Miyeydaan Arkayn in Eebe Ke-xeeyo Daruuro Markaas Isudumo Kana Yeelo Mid is dul Saaran ood aragto Roobkoo ka Soo Bixi Dhexdiisa wuxuuna ka soo Dejiyaa (Eebe) Samada

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يُرْسِئُ سَحَابًا ثُمَّ يُؤَلِّفُ بَيْنَهُ ثُمَّ يَجْعَلُهُ
رُكَامًا فَتَرَى الْوَدْقَ يَخْرُجُ مِنْ خِلَالِهِ وَيُنزِلُ مِنْ السَّمَاءِ
مِنْ جِبَالٍ فِيهَا مِنْ بَرَدٍ فَيُصِيبُ بِهِ مَنْ يَشَاءُ وَيَصْرِفُهُ عَنِ مَنِّ

Buuro Qabow ah (Baraf) wuxuuna Gaadhsiiyaa Cidduu Doono, wuxuuna u Dhawyahay Nuurka Hilaaciisu inuu la Tago Aragga.

44. Wuu Gagadiyaa Eebe Habeenka iyo Dharaarta, Arrintaasna waano Qaadas-ho yaa ugu Sukan kuwa Aragga leh (Caqliga leh).

45. Eebaa ka Abuuray wax Kastoo socda (oo nool) Biyo waxaana ka Mid ah mid ku Socda Calooshiisa, waxaana ka mid ah mid ku Socda Labo Lugood, waxaana ka mid ah mid ku Socda Afar, wuxuu Abuuraa Eebe wuxuu Doono, Eebana wax kasta waa Karaa.

46. Waxaan soo Dejinay Aayaad Cad Cad, Eebana wuxuu ku Hanuuniyaa Cidduu Doono Jid Tosan.

Roobku wuxuu ku jiraa Awoodda Eebe, Isagaana Kulmiya Daruuraha kana Keena Roobka Meeshu Doonana ku Da'siiya, Habeenka iyo Maalintana Eebaa ku Tasarrufa inay ku waana Qaataan kuwa Wax Garadka ah, wax kasta oo Nafley ahna oo Socda Eebaa Biyo ka Abuuray, mid Bog ku Socda, mid Labo ku Socda iyo Mid Afar ku Socdaba, wuxuu Doonana wuu Abuuraa, wax walbana waa Karaa, wuxuuna Soo Dejiyay Aayaad Cad Cad, Cidduu doonana wuxuu ku Toosiyaa Jidka Toosan. Taasina waxay Sugi In Eebe wax walba Ogyahay Awoodana Leeyahay, Biyahana laga Abuuray Naflayda, kalana Duway Socodkooda iyo Abuurkooda, wuxuu Doona uu Abuuri, waxayna Aamusiin Gaalada, Mulxidiinta, jaahiliinta iyo Kuwa Rumeeya oo Raaca Kuwaas. An-Nuur (43-46).

47. waxay Dhihi (Munaafiqiintu) Waxaan rumeeynay Eebe iyo Rasuulka waana Adeecnay markaasaa waxaa Jeedsada Kooxo ka Mid ah Intaas ka Dib, Kuwaasi ma aha Mu'miniin.

48. Marka loogu Yeedho Eebe iyo Rasuulkiisa inuu kala Xukumo Dhexdooda wasxaa soo Baxa Koox ka Mid ah oo Jeedsan.

49. Hadduu Xaqu iyaga U sugnaado way u Yimaadaan iyagoo Adeeci.

50. Ma Qalbigay ka Bukaan mise way Shakiyeen mise waxay Cabsan in

يَسَاءُ بِكَادُ سَنَابِرِهِ يَدَهُبُ بِالْأَبْصَرِ ﴿٤٣﴾

يَقَلِبُ اللَّهُ الْآيِلَ وَالنَّهَارَانَ فِي ذَلِكَ لَعِبْرَةٌ لِّأُولِي الْأَبْصَرِ ﴿٤٤﴾

وَاللَّهُ خَلَقَ كُلَّ دَابَّةٍ مِنْ مَّاءٍ فَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى بَطْنِهِ وَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى رِجْلَيْنِ وَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى أَرْبَعٍ يَخْلُقُ اللَّهُ مَا يَشَاءُ إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤٥﴾

لَقَدْ أَنْزَلْنَا آيَاتِنَا مُبَيِّنَاتٍ وَاللَّهُ يَهْدِي مَنْ يَشَاءُ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٤٦﴾

وَيَقُولُونَ ءَأَمَنَّا بِاللَّهِ وَبِالرَّسُولِ وَأَطَعْنَا ثُمَّ تَوَلَّوْا قُلُوبِكُمْ مِنْهُمْ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَمَا أُولَئِكَ بِالْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

وَإِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ إِذَا فَرِيقٌ مِنْهُمْ مُعْرِضُونَ ﴿٤٨﴾

وَإِنْ يَكُنْ لَهُمُ الْحُكْمُ يَأْتُوا إِلَيْهِ مُدْعِينَ ﴿٤٩﴾

أَلَيْسَ لَهُمْ مَرْءٌ أَمْ آتَاؤُهُمْ يَخَافُونَ أَنْ يَحِيفَ اللَّهُ

Eebe ku Jawr falo iyo Rasuulkiisu, saas ma aha ee kuwaasu waa kuwo Daalimiin ah.

عَلَيْهِمْ وَرَسُولُهُمْ أُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿٥١﴾

51. Mu'minka Hadalkiisu marka loogu yeedho Eebe iyo Rasuulkiisu inuu kala Xukumo Dhexdooda waa uun Inay Dhahaan waan Maqallay waana Adeec-nay Kuwaasuna waa uun kuwa Liibaanay.

إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ الْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيُحْكَمَ بَيْنَهُمْ أَنْ يَقُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿٥١﴾

52. Ciddii Adeecda Eebe iyo Rasuulkii-sa oo Cabsata kana Dhawrsata Kuwaasi waa uun kuwa Liibaanay.

وَمَنْ يُطِعِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَخْشِ اللَّهَ وَيَتَّقْهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْقَائِرُونَ ﴿٥٢﴾

Munaafiqiintu Had iyo Jeer waa Col kugu Dhex jira iyo Dhiqle Muslimiinta Xasilka u diida, Afkana waxay ka Sheegaan inay Xaq Rumeeyeen, haddana way ka Jeedan Xaq, marka loogu yeedho in Xaq lagu kala Xukumo way Jeedsan, Hadday u Fili in Iyaga loo Xukunina way Yimaadaan iyagoo Rumeysan oo Maqli Taasna waxaa ugu Wacan inay Qalbiga ka bukaan shakina kaga Jiro Caddaaladda Eebe iyo Rasuulkiisa waana Daalimiin, Mu'miniintuse way Maqli oy Adeeci marka loogu Yeedho Xukunka Eebe iyo Rasuulkiisa, waana kuwa Liibaanay ee Adeecay Eebe iyo Rasuulka, Eebana ka Cabsada kana Dhawrsada, waana kaas Xumida Diidada shreiga Eebe iyo u hogansankiisa, wax Xukunka Eebe la mid ah ama ku Dhawna ma Jiro, waana in lagu Dhaqmo. An-Nuur (47-52).

53. waxay ugu Dhaarteen Eebe (Munaafiqiinta) Dhaar Daran inay u Baxaan (Jihaad) waxaad Dhahdaa ha Dhaaranina Addeecid la Yaqaan (ha Ahaado Xaalkiinnu) Eebana waa Ogyahay waxaad Falaysaan.

* وَأَقْسَمُوا بِاللَّهِ جَهْدَ أَيْمَانِهِمْ لَنْ أُمرَهُمْ لِيَخْرُجُوا قُلُوبَهُمْ فَلَا تُقْسِمُوا طَاعَةَ مَعْرُوفَةَ إِيَّاتِ اللَّهِ خَيْرٌ لِمَا تَعْمَلُونَ ﴿٥٣﴾

54. Waxaad Dhahdaa Addeeca Eebe oo Addeca Rasuulka Haddaad Jeedsataan-na waxaa uun Korkiisa ah (Nabiga) waxa la Saaray (la Faray) idinkana waxa Korkiinna ah waxa laydin Saaray (Xaq raacid) haddaad Addeecdaan (Nabiga) waad Hanuunaysaan, Rasuul-kana ma Saarra waxaan Gaadhsiin Cad ahayn.

قُلْ أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ فَإِن تَوَلَّوْا فَإِنَّمَا عَلَيْهِ مَا حُمِّلَ وَعَلَيْكُمْ مَا حُمِّلْتُمْ وَإِن تُطِيعُوا فَتَهْتَدُوا وَمَا عَلَى الرَّسُولِ إِلَّا الْبَلْغُ الْمُبِينُ ﴿٥٤﴾

55. Wuxuu u Yaboohay Eebe kuwa Rumeeyay Xaq oo Camal Fiican Falay inuu u Reebo Dhulka siduu ugu Reebay kuwii ka Horreeyay, wuxuuna

وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنكُمْ وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَيَسْتَخْلِفَنَّهُمْ فِي الْأَرْضِ كَمَا اسْتَخْلَفَ

Makanin Diintooda uu uga Raalli Noqday wuxuuna ugu Badali Cabsidooda ka Dib Nabadgalyo, wayna I caabudi Ilamana Wadaajiyaan waxba, Ciddii Gaalowda intaas Ka Dibna kuwaasu waa uun Faasiqiin.

الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَلَيَمَكِّنَنَّ لَهُمْ دِيَارَهُ الَّذِينَ
 أَنْصَحُوا لَهُمْ وَلَيَمَكِّنَنَّ لَهُمْ مِنْ بَعْدِ حَوَافِهِمْ
 آمَنَّا بِعِبَادُوكَ إِنِّي لَأَشِيرُكَ فِي سَعْيِكَ وَمَنْ كَفَرَ بَعْدَ
 ذَلِكَ فَأُولَئِكَ هُمُ الْقَائِمُونَ ﴿٥٥﴾

Munaafiqiin wax badan yey Been ku Dhaartaan, waxaase u Wanaagsan Raacid Xaq iyo Addeecid, Cid walbana waxaa laga Rabaa waxa la Saaray, Aayadda kale waxay ka Hadli in Eebe u Yaboohay Mu'miniinta inay Dhulka U Hadhi oy Xukumi Hadday Xaqa Rumeeyaan, Wanaagna Falaan, Markaasuu Makanin Diintooda uu ka Raalli Noqday Cabsidana Ammaan Ugu Badali, Eebe kaliyana Ay Caabudi, Wuuna U Rumoobay Mu'miniintii Hore Yabooha Eebe, markay Xaqa Raaceen oo Sharciga Eebe Isku Dhaqeen, Ciddii Saas Fashana wuu u Gargaari Eebe Waqti kasta. Waxaa laga Wariyey Cadi Binu Xaetim inuu Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelee) U yimid uuna ku Yidhi: Ma taqaan Xiiro, oo yidhi ma aqaan waanse maqlay, oo Nabigu Yidhi (Eebaan ku Dhaartaye wuu Taamyeeeli Eebe Diintan inta Haweenaydu ka Baxdo Xiiro oy ka Dawaafto Baydka Iyadood Cidna Hoos Galin, waxaana la Furan Kinsiga Kisre Binu-Hurmus markaasaan Idhi Kisre Binu Hurmus markaasuu yidhi Haa Kisre Binu Hurmus wuxuu Yidhi Cadi wataas Haweenaydu iska Dawaafi Baydka Iyadoo Xiira ka Soo Tagtay Nabadgalyo, waxaanan ka Mid ahaa Dadkii wax ka Furtay Kansigii Kisre Binu Hurmus Wallee Tii Seddexaad ee Nabigu Sheegayna waa la Heli. Waxaa kale oo sugnaaday: Ugu Bishaaree Umaddan Sharaf, Sarreyn, Diin, Gargaar iyo Makanid Dhulka, Markay Toosaan. An-Nuur (53-55).

56. Ooga Salaadda, Bixiya Zakada oo Addeeca Rasuulka waxaad Mudantihiin in laydiin Naxariistee.

وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَاطِيعُوا الرُّسُلَ
 لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٥٦﴾

57. Hana Umalayn Kuwa Gaaloobay inay ku Daalin (Eebe) Dhulka, Guryahooduna Waa Naar waxaana u Xun Meel Loo Ahaado (Naar).

لَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا مُعْجِزِينَ فِي الْأَرْضِ
 وَمَأْوَاهُمُ النَّارُ وَلَيْسَ الْمَصِيرُ ﴿٥٧﴾

58. Kuwa Xaqa Rumeeyow Haydin Idan Warsadeen kuway Hanatay Gacantiinnu, iyo Kuwaan Qaan Gaadhin oo Idinka Mid ah Saddex Jeer, Salaadda Suxab ka Hor iyo Markaad iska Dhigtaan Dharka Duhurkii, iyo salaadda cishaha kadib, waa saddex Waqti oo Cawro ah (la Nasto), ma aha Korkiinna iyo Korkooda midna Dhib (ma Saarra) intaas ka Dib, way idin kor Socaan (Shaqeeyaan) Qaarkiinna Qaarbuu ka Ahaaday, saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayaadkiisa Eebana waa Oge Falsan.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لِيَسْتَلْزَمُوا الَّذِينَ مَلَكَتْ
 أَيْمَانُهُمُ وَالَّذِينَ يَزِينُوا لُزْمَةَ الْكُفْرِ تِلْكَ مَرْجَاتٌ مِنْ قَبْلِ
 صَلَوةِ الْفَجْرِ وَحِينَ تَضَعُونَ ثِيَابَكُمْ مِنَ الظَّهِيرَةِ
 وَمِنْ بَعْدِ صَلَوةِ الْعِشَاءِ تِلْكَ عَوْرَاتُ لَأَكْفُرَنَّ عَلَيْكُمْ
 لِأَنَّ عَلَيْهِمْ جُنَاحٌ بَعْدَهُنَّ طَوَافُونَ عَلَيْهِمْ بَعْضُكُمْ
 عَلَى بَعْضٍ كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ
 وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٨﴾

59. Markay Carruurtiinnu Qaangaadhana haydin Idan warsadeen siday idiin Idamwarsadeen kuwii ka Horreeyay, saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayaadkiisa, Eebana waa Oge Falsan.

وَإِذَا بَلَغَ الْأَطْفَالُ مِنْكُمْ الْحُلُمَ فَلْيَسْتَأْذِنُوا
كَمَا اسْتَأْذَنَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ كَذَلِكَ يُبَيِّنُ
اللَّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٩﴾

60. Kuwa ka Fadhiistay (Ka quustay dhalhada) oo Haweenka ah oon guur Rajaynayn Korkooda Dhib (Dambi) ma Saarra inay iska Dhigaan Dharkooda (Iska Fududeeyaan) iyagoon ismuujinayn Qurux, Inay Dhawrsadaan yaase u Khayr Roon Eebana waa Maqle Og.

وَالْقَوَاعِدُ مِنَ النِّسَاءِ الَّتِي لَا يَرْجُونَ نِكَاحًا
فَلَيْسَ عَلَيْهِنَّ جُنَاحٌ أَنْ يَضَعْنَ نِجَابَهُنَّ عَيْرَ
مُتَرَجِّطٍ بِرِيسَتِهِ وَأَنْ يَسْتَعْفِفْنَ خَيْرٌ
لَهُنَّ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٦٠﴾

Oogidda Salaadda, Bixinta Zakada, iyo Addeccidda Rasuulka waa Sababaha Naxariista, wax Eebe Daalinna ma Jiro, Gaalana wuxuu ku Abaal Marin Naar. Aayadaha kale waxay ka warrami in Guryaha Galiddooda la Dhawro Gaar ahaan Saddex Waqti oo cid kasta laga rabo inay idan warsadaan, Xataa Dadka Gacantooba ku Hoos Nool, Carruurtuna mar hadday Qaangaadho waa inay Idam warsadaan. Haweenka Duqoobayna Hadday Dharka iska Fududeeyaan wax ma Saarra haddayna Cawro Faydayn ama Isqurxinayn, waxaase Fiican Is Asturka. An-Nuur (56-60).

61. Ma saarra Indhoole Dhib, Lugoolana Dhib ma Saarra, Mid Bukana Dhib Ma Saarra, Naftiinnana Dhib ma Saarra Inaad wax ka Cuntaan Guryinhiinna Ama Guryaha Aabayaalkiini, ama Guryaha Hooyooyinkiini, ama Guryaha Walaalihiini, ama Guryaha Walaashiini, ama Guryaha Adeeradiini, ama Guryaha Eeddooyinkiini, ama Guryaha Abtiyadiini, ama Guryaha habaryarihiini, ama Guryahaad Hanataan Furihiisa, ama Guryaha Saaxiibaahiini, Dhibna Idinma Saarra Inaad wax Cuntaan Idinkoo Kooxa ah ama kala Tagsan, markaad Gashaan Guryana Salaama Naftiinna, Salaan ka Ahaatay Eebe Xagiisa oo la Brakeeyey oo Fiican, Saasuuna idiinku Caddayn Eebe Aayaadka Inaad wax kastaan.

لَيْسَ عَلَى الْأَعْمَى حَرَجٌ وَلَا عَلَى الْأَعْرَجِ حَرَجٌ
وَلَا عَلَى الْمَرْيُومِ حَرَجٌ وَلَا عَلَى الْأَنْفُسِكُمْ أَنْ
تَأْكُلُوا مِنْ يُوْتِكُمْ أَوْ يُوْتُوا عَابَاءِكُمْ
أَوْ يُوْتُوا أُهْمَتِكُمْ أَوْ يُوْتُوا إِخْوَانِكُمْ
أَوْ يُوْتُوا أَخْوَانِكُمْ أَوْ يُوْتُوا أَعْمَامِكُمْ
أَوْ يُوْتُوا عَمَتِكُمْ أَوْ يُوْتُوا آخْوَالِكُمْ
أَوْ يُوْتُوا خَالَاتِكُمْ أَوْ مَا مَلَكَتْ
يَمِينُكُمْ مِنْ أَوْلَادِكُمْ لِلَّذِينَ عَلَى أَيْدِيكُمْ
مِنْ الْوَالِدِ وَالْأَقْرَبِينَ وَلِلزَّوْجِ
مِمَّا تَرَكَ الْوَالِدُ وَالْأَقْرَبُونَ وَلِلْمَرْءِ
مِمَّا تَرَكَ الْوَالِدُ وَالْأَقْرَبُونَ وَلِلْمَرْءِ
مِمَّا تَرَكَ الْوَالِدُ وَالْأَقْرَبُونَ وَلِلْمَرْءِ
مِمَّا تَرَكَ الْوَالِدُ وَالْأَقْرَبُونَ وَلِلْمَرْءِ
مِمَّا تَرَكَ الْوَالِدُ وَالْأَقْرَبُونَ
عِنْدَ اللَّهِ مَبْرَكَةٌ طَيِّبَةٌ كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ
لَكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٦١﴾

62. Mu'miniintu Waa Un kuwa Ru-meeyey Eebe iyo Rasuulkiisa, markay la Joogaan Amar kulmiyey Dartiis aan

إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَإِذَا
كَانُوا مَعَهُ عَلَى أَمْرٍ جَامِعٍ لَمْ يَذْهَبُوا حَتَّى يَسْتَأْذِنُوهُ

Tagin intay ka Idan Warsadaan, kuwa Idan warsada kuwaasu waa kuwa Rumeeye Eebe iyo Rasuulkiisa, ee hadday kuu Idan warsadaan Danahooda Qaarkood u Idan Cidaad Doonto oo ka mid ah una Dambi Dhaafwarso Eebe, Ilaahay waa Dambi Dhaafe Naxariistee.

إِنَّ الَّذِينَ يَسْتَعِذُونَكَ الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ
بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ فَإِذَا أَسْتَدْرَكَ لِبَعْضِ شَأْنِهِمْ
قَالُوا لَنْ نَمُنَّ مِنْهُمْ وَأَسْتَغْفِرُ لَهُمْ اللَّهُ
إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٦٦﴾

Aayadahanna waxay ka Warrami Aadaabo Kale iyo inay Bannaantahay in wax lala Cuno Dadka Naafada ah iyo kuwa buka, waxna lagu Cuno Guryaha Qaraabada iyo Saaxiibada iyo Kuwaad Hanataan Furahoodaba, sidoo kale in Koox Koox wax loo Cuno ama kali kali iyo in laysa Salaamo marka la Gali Guryaha, waxaa soo Dhanna waa wax Eebe u Caddayn si ay u Ogaadaan, Taasina waxay ku Tusin sida Diinta Islaamku wax walba oo Dani ku Jirto u Caddaysay, Aayada Kalana waxay Caddayn inay Ahaayeen Mu'miniintii Dhabta ahaa kuwaan ka Tagin Kulanka Nabiga Iyagoon Idan warsan, Nabiguna wuu idmi Jiray Cidday la Noqoto, Taasina waxay Muujin in laga Murgo Danaha Muslimiinta oon lana Ganta Furin ee la Dhawro isku Xidhnaantooda iyo Danahooda. An-Nuur (61-62).

63. Ha ka Yeelina u Yeedhidda Rasuulka sida U Yeedhidda Qaarkiin qaar, Eebe wuu ogyahay kuwa Dusi iyagoo Gabban (Fadhiga Nabiga) ha ka Digtoonaadeen kuwa Khilaafi Amarka Nabiga inay ku Dhacdo Fidmo (Masii-bo) ama ku Dhoco Cadaab Daran.

لَا تَجْعَلُوا دُعَاءَ الرَّسُولِ بَيْنَكُمْ كَدُعَاءِ
بَعْضِكُمْ بَعْضًا قَدْ يَعْلَمُ اللَّهُ الَّذِينَ يَسْتَلُونُ
مِنْكُمْ لَوْ أَن فَالِحٌ حَذَرَ الَّذِينَ يُخَالِفُونَ عَنْ
أَمْرِهِ أَن تُصِيبَهُمْ فِتْنَةٌ أَوْ يُصِيبَهُمْ عَذَابٌ
أَلِيمٌ ﴿٦٧﴾


64. Eebaa iska Leh waxa ku Sugaan Samooyinka iyo Dhulka, waana Ogyahay Waxaad ku Sugantihiin, iyo Maa-linta Loo Celin Xaggiisa, oo uga Warami waxay Camal faleen, Eebana wax kasta waa Ogyahay.

أَلَا إِنَّ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ قَدْ يَعْلَمُ مَا
أَنْتُمْ عَلَيْهِ وَيَوْمَ يُرْجَعُونَ إِلَيْهِ فَيُنَبِّئُهُم بِمَا
عَمِلُوا وَاللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٦٨﴾

Ibnu Cabbas wuxuu Sheegay in Asaxaabtii ay nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ugu Yeedhi Jireen si Caadi ah oo Magaciisa ah markaasaa Eeba faray inay Qadiriyaan oo ugu Yeedhaan si Haybad leh, Eebana waa Ogyahay Munaafiqiinta ka Dusi Jiray Fadhiga Nabiga, Dadkuna haka Digtoonaadeen Khilaafka Amarka Nabiga, Taasoo Fidmo iyo dhib ka Dhalan ama Cadaab Daran, Eebana waxaa u Sugnaaday Xukunka iyo Awoodda Khalqiga, wuuna Ogyahay waxay ku sugnaan Adduun iyo Aakhiraba, wuuna Abaal marin Aayadduna waxay uga Digi Dadka Khilaafka Nabiga iyo inaan lala Imaan wuxuusan Idmin. Nabiguna. (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha Yeelee) Wuxuu Yidhi: Ruuxii fala Camal aanahayn Amarkanaga waa lagu Celin.

Suuraddanna waa Suurad wayn oo ka Warranta Aadaab Wayn, sida Ilaalinta Carrabka, iska Ilaalinta Zinada, Dhawridda Sharafta Muslimiinta iyo Dadka, Dhawridda Galidda Guryaha Dadka, Isa

Salaamidda Indha Laabashada Ragga iyo Haweenka, Is asturidda Haweenka iyo Ilaalintooda Sharftooda, Qiimaha Islaamka iyo Iimaanka, Awoodda Eebe, Caddaaladda iyo Raacidda Xaqa, in Muslimiinta Toosan U hadhi Dhulka, Dhawrida Danaha iyo Fadhiga Musliniinta, Ixtiraamka Nabiga iyo Raacidda Amarkiisa. Saas Darteed Yey Cumar binu Khadhaab iyo Caa'ishaba U Fari jireen Muslimiinta inay Haweenkooda Baraan Suuraddan, Suuratu NUUR.. An-Nuur (63-64).



Suurat Al-Furqaan



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Waxaa Khayr Batay (oo wayn) Eebaha ku soo Dejiyey Quraanka Ad-doonkiisii (Nabiga) inuu u ahaado Caalamka u Dige.

2. Eebaha uu u Sugnaaday Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, Yeelaninna Ilmo una Sugnaanin Shariig (la Wadaage) Xukunka, Abuurayna wax kasta, oo u ahaysiiyey si Qiyaasan.

3. waxay ka Yeesheen Eebe ka Sokow Ilaahyo oon Abuurayn waxba Iyagana la Abuuri una hananayn Naftooda Dhib iyo Nacfi (Midna) oonan hananayn Geeri iyo Nolol iyo soo Bixin (midna).

4. waxay Dheheen Gaaladii kani (quraanku) ma aha waxaan Been Abuur ahayn, uu la Yimid, Uguna Kaalmeeyeen Qoom kale, waxay la Yimadeen Dulmi iyo Been (Daran).

5. waxay Dheheen waa Warkii Dadkii Hore oos ka Qoray Iyadaana loo Yeedhiyaa Aroor iyo Galabba.

6. Waxaad Dhahdaa waxaa soo Dejiyey Eebaha Og waxa ku Qarsoon Samooyinka iyo Dhulka waana Dambi Dhaafe Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

بَارَكَ الَّذِي نَزَّلَ الْفُرْقَانَ عَلَى عَبْدِهِ لِيَكُونَ لِلْعَالَمِينَ نَذِيرًا ﴿١﴾

الَّذِي لَهُ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَلَمْ يَتَّخِذْ وَلَدًا
وَلَمْ يَكُن لَّهُ شَرِيكٌ فِي الْمَلِكِ وَخَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ
فَقَدَرَهُ تَقْدِيرًا ﴿٢﴾

وَأَتَّخَذَ مِنْ دُونِهِ آلِهَةً لَّا يُخَلِّقُونَ شَيْئًا وَهُمْ
يُخَلِّقُونَ وَلَا يَمْلِكُونَ لَأَنْفُسِهِمْ ضَرًّا وَلَا نَفْعًا
وَلَّا يَمْلِكُونَ مَوْتًا وَلَا حَيَاةً وَلَا نُشُورًا ﴿٣﴾

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا إِنْ هَذَا إِلَّا آيَاتُنَا وَمَا
نَحْنُ بِمُؤْمِنِينَ ﴿٤﴾

وَقَالُوا أَتُحَدِّثُونَ آيَاتُنَا وَتَقُولُونَ
عَلَيْهِ بُعْرَةٌ وَأُصِيلًا ﴿٥﴾

قُلْ أَنْزَلَهُ الَّذِي يَعْلَمُ السِّرَّ فِي السَّمَوَاتِ
وَالْأَرْضِ إِنَّهُ كَانَ عَلِيمًا رَحِيمًا ﴿٦﴾

Waxaa Ammaan Mudan Eebaha ku Soo Dejiyey Quraanka kala Bixiiyey Xaqa iyo Baadilka Ad-doonkiisii Muxamed ahaa waana wax Eebe ku Tilmaamo Dadka waxa u wayn, si uu Caalamka Ugu Digo Dhammaantii, waxayna ku Tusin Caalamnimada Diinta Islaamka, Xukunkana Eebaa Iska leh, Ilmo iyo Shariigna ma leh, wax walbana isagaa Abuuray, Cid wax Abuuri karta oo Eebe ka soo

Hadhayna ma Jirto, ama Hanta Dhib, Nacfi, Geeri, Nolol, iyo soo bixin midna.

Quraankuna waa Dhab Sugaan oo Eebe soo Dejiyey, wax Nabigu la Imaan karana ma aha, Ciddii warkaas Sheegtana waa Mid Beenalay ah ee halla Yimaadeen wax la mid ah intay Isu Tagaan, Dhabtuna waa inay Beenaalayaal Caqli daran Yihiin, Warkooduna wax u Dhimimaayo Xaqnimada Quraanka, Sharaftiisa iyo Caalaminiyadiisa, siduu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u Yidhi: Waxaa Laydiray Dadka Dhamaantiis. Saas Darteed waa inay ku Eegaan Il Xaq ah. Al-Furqaan (1-6).

7. waxay dheheen Gaaladii Muxuu leeyahay Rasuulkani oos u Cuni Cunto una Socon Suuqa, maa loo Soo Dejiyo Malag oo ahaado mid la Diga.

وَقَالُوا مَا لِهَذَا الرَّسُولِ يَأْكُلُ الطَّعَامَ
وَيَحْيَىٰ فِي الْأَسْوَاقِ لَوْلَا أُنزِلَ إِلَيْهِ مَلَكٌ
فَيَكُونَ مَعَهُ نَذِيرًا ﴿٧﴾

8. Ama maa loo Tuuro (Dejiyo) Kansi ama u ahaato Beer uu wax ka Cuno Xageeda, waxayna Dheheen Daalimiintu ma Raacaysaan waxaan Nin Sixran ahayn.

أَوَلَمْ يَلْقَ إِلَىٰ مَكَانٍ أُولَٰئِكَ لَهٗ جَنَّةٌ يَأْكُلُ
مِنْهَا وَقَالَ الظَّالِمُونَ إِن تَتَّبِعُونَ إِلَّا رَجُلًا
مَّسْحُورًا ﴿٨﴾

9. Bal day siday kuugu Yeeleen Tusaale oy u Dhumeen una Karin (Qaadidda) Jidka (Xaqa).

أَنْظُرْ كَيْفَ صَرَّفُوا لَكَ الْأَمْثَالَ فَضَلُّوا
فَلَا يَسْتَطِيعُونَ سَبِيلًا ﴿٩﴾

10. Waxaa Khayr Badan Eebaha Had-duu Doono kuu Yeeli wax ka Khayr-roon Taas, Jannooyinna (Kuu yeele) oy Socoto Dhexdeeda Wabiyaal Kuuna Yeeli Daaro (Janno).

تَبَارَكَ الَّذِي إِنْ شَاءَ جَعَلَ لَكَ خَيْرًا مِنْ ذَلِكَ
جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ وَيَجْعَلُ لَكَ
فُضُورًا ﴿١٠﴾

11. waxayse Beeniyeen Saacadda (Qiyaame) waxaana u Darabnay Ciddii Beenisa Saacadda Naarta Saciira.

بَلْ كَذَّبُوا بِالسَّاعَةِ وَأَعْتَدْنَا لِمَنْ كَذَّبَ بِالسَّاعَةِ
سَعِيرًا ﴿١١﴾

12. Markay ka Aragto Meel Fog waxay ka Maqlaan Cadho iyo Guux.

إِذَا رَأَوْهُمُ مِنَ مَكَانٍ بَعِيدٍ سَمِعُوا لَهَا تَغَيُّظًا
وَزَفِيرًا ﴿١٢﴾

13. Marka lagu Tuuro Dhexdeeda Meel Cidhiidhi ah Iyagoo isku Xidhan waxay u Yeedhaan Halaag, iyo (Khasaare).

وَإِذْ أَلْفُوا مِنْهَا مَكَانًا صَبِيحًا مُقِرَّيْنَ دَعَا
هَٰذَا لَئِكَ نُورًا ﴿١٣﴾

14. (waxaana la Dhihi) Howyeedhanina Maanta Halaag Kaliya ee u Yeedha Halaag Badan.

لَا تَدْعُوا الْيَوْمَ نُورًا وَجَدُوا دَعْوَىٰ نُورًا
كَتَبِيرًا ﴿١٤﴾

Gaalada iyo Xaq diidayaashu si Xun bay wax u Qiyaasaan una Qiimeeyaan, waxaana ka mid ah inay Sheegeen in Nabigu wax Cuni, oo Suuqa Socon, iyo Maxaa Malag loola soo Diri waayey, ama Xoolo Badan loo Sin Waayey, Taasina waxay ku Tusin inay Il Xoola Jacayl ku Dayi wax walba, maxaase Xoolo Qiima leeyihiin Haddaan Xaqa Loogu Gargaarin, ama lagu Bixin, waase karaa Eebe inuu Siyo

Nabiga wax ka Wanaagsan waxaas, wuxuuna Siyey, Nabinimo, Quraan uu ku Soo Dejiyey, iyo Wanaag Aakhiro, Maxayse Gaalo Fali markay la Kulmaan Naar Daran oo Guuxi, waa uun Calaacal iyo Oohin, waxaana Sugnaatay in Qof loo Jiidi Naarta oy u soo Ciyi sida Baqal Shaciir loo soo Fidiyey, una soo Gunuunici, isagoon jirin Ruuxaan Cabsanayn. Al-Furqaan (7-14).

15. Waxaad Dhahdaa Ma Taasaa Khayrroon mise Jannada Waaridda ee ah Middii loo Yaboohay kuwa Dhawrsada, waxayna u Ahaatay Kuwaas (Dhawrsada) Abaal Marin iyo Noqosho.

قُلْ أَذْلِكَ خَيْرٌ أَمْ حَبَّةُ الْخُلْدِ الَّتِي وُوعِدَ
الْمُتَّقُونَ كَانَتْ لَهُمْ حَزَّارَةً وَمَصِيرًا ﴿١٥﴾

16. waxayna ka Helayaan Dhexdeeda waxay Doonaan wayna ku Waari, Arrintaasuna waa Yabooh uu isa saaray Eebahaa oo Sugaan.

لَهُمْ فِيهَا مَا يَشَاءُونَ خَالِدِينَ كَانَ عَلَى
رَبِّكَ وَعْدًا مَسْئُولًا ﴿١٦﴾

17. Xusuusta Maalintaan Kulminayno Gaalada iyo waxay Caabudi oo Eebe ka soo Hadhay oos ku Dhihi Ma idinkaa Dhumiyeey Addoomadaydaas, Mise Iyagaa ka Dhumay Jidka.

وَيَوْمَ يَخْشَوْنَهُ وَمَا يُعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ
فَيَقُولُ أءَأَنْتُمْ أَضَلُّنَا عَبَادِي هَلْؤَلَاءِ أَمْهَمُّ
صَلُّوا السَّبِيلَ ﴿١٧﴾

18. waxayna Odhan Waad Nasahantahay Naguma Habboona Inaan Yeelan- no Adi ka Sokow Awliyo (Gargaare), waadse u Raaxaysay iyaga iyo Aabayaalkood Intay ka Halmaamaan Waxyiga, waxayna Noqdeen kuwa Halaagsamay.

قَالُوا سُبْحَانَكَ مَا كَانُوا يَسْتَعْبُدُونَ لَنَا أَن نَّتَّخِذَ مِن
دُونِكَ مِن أَوْلِيَاءَ وَلَئِن مَّتَّعْتَهُمْ وَاٰبَاءَهُمْ
حَتَّىٰ نَسُوا الذِّكْرَ وَكَانُوا قَوْمًا بُورًا ﴿١٨﴾

19. Way Idinku Beniyeen Waxaad Sheegaysaan mana Kartaan Furasho iyo Gargaar midna, Ciddii wax Dulmida oo Idinka midah Waxaannu Dhadhansiin Cadaab Wayn.

فَقَدْ كَذَّبْتُمْ بِمَا تَعْلَمُونَ فَمَا
سَسْطَلِعُونَ صَرْفًا وَلَا تَصْرًا وَمَن يَظَلْمِ
فَتَعْمُرْ نَزْدَةً عَدَابًا كَعِيدًا ﴿١٩﴾

Masinna Wanaagga Eebe U darbay Mu'miniinta, iyo Ciqaabta Gaalada, Kuwaasoo ay Isdiidi waxay Caabudi Jireen Eebe ka Sokow, Taasina waxay ku tusin in Saaxiibnimo iyo Isku Xidhnaankasta oon Xaqa Ahayn ay u Dambayn kala Tag iyo Colnimo iyo in Cibaado ka soo hadhay Tan Eebe ay Tahay Khasaare, iyo Wadda kasta oon Ahayn Midda Eebe ee Islaamka ah ay Tahay Dhumid iyo Lugooyo. Al-Furqaan (15-19).

20. Manaas Dirin Rasuul kaa Horeeyey oon Cunayn Cunnada Soconaynna

وَمَا أَرْسَلْنَاكَ مِنَ الْمُرْسَلِينَ إِلَّا أَنَّهُمْ
يَأْكُلُونَ الطَّعَامَ وَيَمْشُونَ فِي الْأَسْوَاقِ

Suuqa, waxaana uga Yeellay Qaarkiin Qaarka kale Fidmo (Ibtilo) ee ma Samraysaan, Eebahaana waa Arke.

وَجَعَلْنَا بَعْضَكُمْ لِبَعْضٍ فِتْنَةً
أَتَّصِرُوتُ ۗ وَكَانَ رَبُّكَ بَصِيرًا ﴿٥١﴾

21. waxay Dheheen Kuwaan Rajaynayn la kulankanaga maxaa naloogu soo Dejinwaayey Malaa'ig, ama maan Aragno Eebahanno, way Iskibriyeen (isula waynaadeen) Naftooda wayna Madax Adaygeen Madax Adayg Wayn.

* وَقَالَ الَّذِينَ لَا يَرْجُونَ لِقَاءَنَا أَلَمَلِكُتْهُ أَوْنِي رَبُّنَا لَقَدْ آتَيْنَاكَ رُؤْيَا
أَنفُسِهِمْ وَعَتَوْعَتُوا كَيْدًا ﴿٥١﴾

22. Maalintay Arki Malaa'igta (Geerida) ma Bishaaraystaan Maalintaas Dambiilayaashu, waxayna Odhan Xijaab oodan iyo Reebnaan yaa ah (Wanaag iyo Isla kulan majiro).

يَوْمَ يَرَوْنَ الْمَلَائِكَةَ لَا بُشْرَىٰ يَوْمَئِذٍ لِلْمُجْرِمِينَ
وَيُقْبَلُونَ فَحَبْرًا مَّحْجُورًا ﴿٥٢﴾

23. Waannu u soo Hormarinay waxay Faleen oo Camal ah waxaana ka yeelay Dhalanteed la Firdhiyey.

وَدِدَّمَا إِلَىٰ مَا عَمِلُوا مِنْ عَمَلٍ فَعَلْنَاهُ
هَبَاءً مَّنْجُورًا ﴿٥٣﴾

24. Ehelu Jannaha yaa Maalintaas Khayr Roon Sugnaansho iyo Wanaag badan Qayluushi (Hurdo).

أَصْحَابُ الْجَنَّةِ يَوْمَئِذٍ خَيْرٌ مُّسْتَقَرًّا
وَأَحْسَنُ مَقِيلًا ﴿٥٤﴾

Rasuulladii kama Reenbnayn inay wax Cunaan, Suuqana Socdaan, Dadkana waa Laysku Ibtileeyey Eebana waa Arkaa, Gaalana Xaq uma Leh inay Codsadaan in Malaa'ig lagu soo Dejiyo, ama Codsadaan inay Eebe Arkaan, Taasi waa Isla wayni iyo Kibir aan Meel haysan, Maalintay Malaa'ig Arkaanna Bishaaro ma Arkaan ee waa Balaayo iyo CalaaCal, CalaaCalna wanaag Aakhiro kuma Helaan, Ileen Rumaynbaa u Shardi ah, waxaase Wanaag iyo Khayr ku Bishaaraysan Maalinta Mu'miniinta, wana Kaas kala Tagga aan kulan iyo Dhawaansho ka Dambeyn.

Xadiith Qudsi ah wuxuu Eebe ku Yidhi Nabiga Waan ku Imtixaami, kuguna Intixaami. (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Al-Furqaan (20-24).

25. Xusuuso Maalintay Samadu la Dillaaci Daruuraha, lana soo Dejin Malaa'igta soo Dejin.

وَيَوْمَ تَشْقَىٰ السَّمَاءُ بِالْغَمِّ وَتُرَىٰ الْمَلَائِكَةُ نَزِيرًا ﴿٥٥﴾

26. Xukunka Maalintaas ee Xaqa ah waxaa iska leh Eebaha Raxmaana, waana Maalin Gaalada ku Daran.

أَلَمْ تَكُنْ يَوْمَئِذٍ أَلْفًا عَلَىٰ لِلرَّحْمَنِ وَكَانَ يَوْمَئِذٍ
الْكَافِرِينَ عَسِيرًا ﴿٥٦﴾

27. Xusuusana Maalintuu Qaniini Daa-limku Gacantiisa (Faraha) Isagoo Dhihi Shalleytee maan Yeesho la Jirka Rasuulka Jid (maan Rumeeyo).

وَيَوْمَ يَعْصُ الظَّالِمُونَ عَلَىٰ نَفْسِهِمْ وَيَقُولُ تَبَيَّنَتِي
أُخَذْتُ مَعَ الرَّسُولِ سَيْبًا ﴿٥٧﴾

28. Halaag iyo Shalleytee Maxaan hebel Saaxiib uga Yeeshay.

يَوْمَ تَلِيَّ يَلِيَّتِي لَمْ أَخِذْ فَلَانًا حَلِيلًا ﴿٢٨﴾

29. Wuxuu iga Leexiyey Quraanka intuu ii yimid ka Dib, Shaydaanna Dadka Wuxuu u Yahay Dayace (Meel Xun kaga tage).

لَقَدْ أَصَابَنِي مِنَ الذِّكْرِ بَعْدَ إِذْ جَاءَنِي وَكَاتَ الشَّيْطَانُ لِلْإِنْسَانِ خَذُولًا ﴿٢٩﴾

30. Wuxuu Yidhi Rasuulkuna Eebow Qoomkaygii waxay ka Yeeshen Quraankan mid laga Tagay (Ma Maq-laan).

وَقَالَ الرَّسُولُ يَا رَبِّ إِنَّ قَوْمِي اتَّخَذُوا هَذَا الْقُرْآنَ مَهْجُورًا ﴿٣٠﴾

31. Saasaan ugu Yeellay Nabi kasta Col Dambiilayaal ah, Eebana ku Filan Hanuuniye iyo Gargaare.

وَكَذَلِكَ جَعَلْنَا لِكُلِّ نَبِيٍّ عَدُوًّا مِنَ الْمُجْرِمِينَ وَكَفَى بِرَبِّكَ هَادِيًا وَنَصِيرًا ﴿٣١﴾

Sida wax badan Sugnaatay Maalinta Qiyaame waxaa Dhici Doorsoon iyo Waxyaalo waa Wayn, Xukunka Dhabta ahna Eebaa leh Maalintaas waana Maalin ku Culus Gaalada, oyna Qoomamo Faraha la Qaniini, oyna Shallaayi Rumayn la'aanta Rasuulka, oyna Shallaytoon Saaxiibkii Xumaa ee Xaqa ka Leexiyey ey Yeeshen, waxaana Sugan in Shaydaan Yahay Meel Xun Joojiyaha Dadka. Nabiguna wuxuu u Cabtay Eebe markay Gaaladii Beeniyeen kana Tageen Quraanka waxse ku Gaar ah Nabiga ma aha ee Nabi kasta wuxuu Lahaa Col Gaala ah, ka Tagidda Quraankana Waa in La beeniyo, oo la Diido, amaan lagu Dhaqmin oon la Raacin, oon la Akhriyin, oon la Fiir Fiirinin, ama La halmaamo oon Loo Aabo Yeelin, Dhammaann waa Halaag iyo Khasaare.

Aayaduhuna waxay Sugi waynida Quraanka, Xukunka Sugan ee Eebe, Dhibka ku Dhici Gaalo Maalintaas, Calaa calka iyo Shallaytada Gaalada, Xumida Saaxiibka Xun, Shaydaan inuu Dadka Dhibi, Dhibaataada ka tagidda Quraanka iyo ku Camal la'aantiisa, in Gaalo Col u Tahay Xaqa iyo Diinta Islaamka, waxaana ku Habboon Cidda Caqliga leh inay Wanaagna Hor marsataa Xumaantana ka Dheeraato, Quraanka iyo Nabigana si Dhab ah u Raacdo una Rumayso, si ay u Liinbaanto. Al-Furqaan (25-31).

32. waxay Dheheen Kuwii gaaloobay maa lagu Soo Dejiyo Nabiga Quraanka Mar kaliya (Isagoo dhan) saasaan Yeellay, inaan ku Sugno Qalbigaaga, waana kugu Akhriyeynaa Akhrin (Fiican).

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لَوْلَا نُزِّلَ عَلَيْهِ الْقُرْآنُ جُمْلَةً وَاحِدَةً كَذَلِكَ لِنُثَبِّتَ بِهِ فُؤَادَكَ وَرَتَّلْنَاهُ تَرْتِيلًا ﴿٣٢﴾

33. Wixii Tusaale ah oy Kuula Yimaa-daanna waxaannu Kuugula imaan Xaq iyo Fasiraadda u Fiican.

وَلَا يَأْتُونَكَ بِمَثَلٍ إِلَّا جِئْنَاكَ بِالْحَقِّ وَأَحْسَنَ تَفْسِيرًا ﴿٣٣﴾

34. Kuwa lagu soo Kulmin Wajigooda (Naarta) Jahannamo kuwaasu waa ku-wa u Xun meel uguna Dhumid Badan Jid.

الَّذِينَ يُخَشَرُونَ عَلَىٰ وُجُوهِهِمْ إِلَىٰ جَهَنَّمَ أُولَئِكَ سَرْمَكَا نًا وَأَصْلُ سَبِيلًا ﴿٣٤﴾

35. Waxaana Siinay Nabi Muuse Ki-taabkii waxaana ka Yeellay la Jirkiisa Walaalkiis Haaruun Wasiir.

وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ وَجَعَلْنَا مَعَهُ
أَخَاهُ هَارُونَ وَزِيْرًا ﴿٣٥﴾

36. waxaana Nidhi Aada Qoomkii beeniyeey Aayaadkanaga waana baabi'inay (Halaagnay) baabi'in, (Halaagnay).

فَمَلْنَا أَزْهَابًا إِلَى الْقَوْمِ الَّذِينَ كَذَبُوا بِآيَاتِنَا
فَدَمَّرْنَا لَهُمْ تَدْمِيرًا ﴿٣٦﴾

waxay Sheegeen Gaaladii oy Quraanka ku Ceebiyeen, maxaa Loogu soo Dejin waayay Nabiga Quraanka Dhammaantiis Mar qudha, Taasina waa Xujo Xun, Wuxuuna Eebe ugu Soo Dejiyey Quraanka Aayad Aayad iyo Suurad Suurad Xigmo Darteed Sida: Sugidda Qalbiga Nabiga iyo Xoojintiisa, u Jawaabidda Gaalada, Fudaydinta Akhriskiisa iyo Xiifigiisa, la Socodka Dhacdada iyo waxyaalaha Soo Cusboonaan. Gaalana muxuu War u Tari, mar hadday Gali Jahannamo oo u Xun meel loo Hoydo, Nabi Muuse iyo wuxuu Fircoon kala Kulmayna wax badan yuu Quraanku ka Warramay. Ibnu Cabaas wuxuu Yidhi: Quraanka Hal mar yaa lagu Soo Dejiyey Samada Dhaw Habeeyna Layla Tul Qadarkaah, Markaas kadib Loo Soo dejiyey Labaatan Sano, Sida Aayaddu Sheegtay. Al-Furqaan (32-36).

37. (Xusuuso) Qoomkii Nabi Nuux, Markay Beeniyeen Rasuulladii Yaan Maan-Shey Nay Ugana Yeellay Dadka Calaamad, waxaana u Darabnay Daa-limiinta Cadaab Daran.

وَقَوْمٍ نُوحٍ لَمَّا كَذَبُوا الرُّسُلَ أَنْعَمْنَا لَهُمْ
وَجَعَلْنَا لَهُمُ الْآسَاءَ آيَةً وَأَعْتَدْنَا لِلظَّالِمِينَ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿٣٧﴾

38. Caadna waan Halaagnay iyo Thamuud, iyo Rasi (Ceelkii) Ehelkiisii, iyo Quruumo Intaas u Dhaxeeyey oo Badan.

وَعَادًا وَثَمُودًا وَأَصْحَابَ الرَّسِّ وَقُرُونًا بَيْنَ
ذَلِكَ كَثِيرًا ﴿٣٨﴾

39. Dhammaan waxaan u Yeellay Tu-saale Dhammaanna, waan Halaagnay Halaag.

وَكُلًّا ضَرَبْنَا لَهُ الْأَمْثَالَ وَكُلًّا تَبَّرْنَا
تَتْبِيرًا ﴿٣٩﴾

40. Way Tageen Gaaladu Magaaladii lagu soo Daadiyey Roob Xun (Dhagax Cadaab) Miyeyna Arkeyn, waxayse Ahaayeen kuwaan Rajaynayn (ka yaa-bayn) soo kulmin.

وَلَقَدْ آتَيْنَا عَلَى الْقَدْرَةِ الَّتِي أَمْطَرْنَا مَطَرًا السَّوْدَاءَ
أَقْلَامًا يَكُفُّونَ بِرَوْحِهَا كُلَّ أَنُوفٍ
الَّتِي تَبْجُوتُ نُشُورًا ﴿٤٠﴾

41. Hadday ku Arkaan Gaaladu waxay kaa yeeshaan Jeess Jeess, iyagoo (Dhihi) ma kanaa kan Eebe Soo Bixiyey Isagoo Rasuul ah.

وَإِذَا أُولَؤُكَ إِن يَتَّخِذُونَكَ إِلَّا هُزُوًا أَهَذَا الَّذِي
بَعَثَ اللَّهُ رَسُولًا ﴿٤١﴾

42. Wuxuu U dhawaaday inuu Naga dhumiyo Ilaahyadanada Haddaanaan ku Samrin, (ku adkaysan) waxay Ogaa-

إِن كَادَ لَيُضِلَّنَا عَنْهُ الْهَيْبَتَانِ لَوْلَا أَن
صَبَرْنَا عَلَيْهِنَّ وَسَوْفَ يَعْمَلُونَ حِين يَسْرُونَ

daan Markay Arkaan Cadaabka Cidda
Dhunsan.

الْعَذَابُ مَنْ أَصْلُ سَيِّلًا ﴿٤٣﴾

Wax badan Yuu quraanku ka Warramay Nabiyadii hore iyo Qoomkoodii, waxaase loo baahanyahay in lagu waano qaato, Gaaladii Makaadna way ku Jees Jeesi Jireen Nabiga iyagoo diidan Rasuulnimadiisa kuna Madax adaygi Gaalnimadooda iyo Ilaahyadooda Baadilka ah.
Taasina waa Shaqada Xaq Diidayasha ka Hor Jeedsada Xaqa iyo Dadkiisa iyagoo Dhibi oo Ceebeeyn, waxaase Guusha Hela Xaqa inta ku Socota, Day Nabigii iyo Asaxaabtiisii. Al-Furqaan (37-42).

43. Ka Warran Ruux ka Yeeshay
Ilaahiisa Hawaydiisa (Suu Jecelyahay)
Ma adaa Wakiil (Ilaaliye) ka Noqon.

أَرَأَيْتَ مَنْ أَخَذَ إِلَهُهُ هَوْنَهُ أَفَأَنْتَ تَكُونُ
عَلَيْهِ وَكَيْلًا ﴿٤٣﴾

44. Mise waxaad u Malayn in Badan-
kood wax Maqli ama wax kasi, ma aha
waxaan Xoolo oo kale ahayn, Iyagaa-
base ka Sii Dhunsan.

أَمْ تَحْسَبُ أَنْ أَمْسُرَهُمْ يَسْمَعُونَ أَوْ يَعْلَمُونَ
إِنْ هُمْ إِلَّا كَالْأَنْعَامِ بَلْ هُمْ أَصْلُ سَيِّلًا ﴿٤٤﴾

45. Miyeydaan Ogayn sida Eebe u
Fidiyo hadhka, hadduu Doonana wu-
xuu ka Yeeli Lahaa Mid Xasillan
(Taagan) markaasaan uga Yeellay Qor-
raxda korkiisa Daliil (Xujo).

أَلَمْ تَرَ إِلَىٰ رَبِّكَ كَيْفَ مَدَّ الظِّلَّ وَلَوْ شَاءَ لَجَعَلَهُ
سَاكِنًا ثُمَّ جَعَلْنَا الشَّمْسُ عَلَيْهِ دَلِيلًا ﴿٤٥﴾

46. Markaasaan u Soo qabanaa Xaga-
naga Qabasho Yar.

ثُمَّ قَبَضْنَاهُ إِلَيْنَا قَبْضًا سَيْرًا ﴿٤٦﴾

47. Eebe waa kan Idinka Yeelay Ha-
beenka Astur, Hurdadana Raaxo, kana
yeelay Maalinta soo Kulan (Dhaqdha-
qaaq).

وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ اللَّيْلَ لِيَأْسَوا وَالنَّوْمَ سُباتًا
وَجَعَلَ النَّهَارَ نُشُورًا ﴿٤٧﴾

48. Eebe (Sarreeye) waa kan u Dira
Dabaysha Bishaaro Darteed Naxariis-
tiisa (Roobka) Hortiisa, waxaana ka
soo Dejinay Samada Biyo wax Daahi-
riya.

وَهُوَ الَّذِي أَرْسَلَ الرِّيحَ بُشْرًا لِيُبْرِئَنَّ مِنَ
رَحْمَتِهِ وَتَرْفَأَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً طَهُورًا ﴿٤٨﴾

49. Inaan ku Nooleyno Magaalo Dhi-
matay oon kuna Waraabino waxaan
Abuuray, Xoolo iyo Dad Badan.

لِيُخَيَّرَ بِهِ بِلْدَةً مَّيْمَنًا وَشِمْقِيَةً، وَمِمَّا خَلَقْنَا
أَنْعَامًا وَأَنْعَامٍ كَثِيرًا ﴿٤٩﴾

50. waana ku kala Duwnay (Badinay)
Dhexdooda, inay Xusuustaan, Wuuna
Diiday Dadka Badidiis waxaan Gaalni-
mo Badan ahayn.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَاهُ بَيْنَهُمْ لِيَذَّكَّرُوا فَأَبَىٰ أَوَّلَ الْآلِ
إِلَّا كُفُورًا ﴿٥٠﴾

Cid Dhuntay oo Hawadeeda Raacday, Nabiga wax kama Saarra, Illeen waa Xoolahoo kalee, Tan kale waxaa Ka Mid ah Aayaadka Eebe: Fidinta Hooska, Qorraxda, Habeenka, Maalinta, iyo Roobka Dhulka Nooleeya, Hase Yeeshee Dadka Badidiis waxay Doorsteen Gaalnimoo, waxyaalaahas la soo Sheegayna waxay inoogu Yeedhi Rumaaynta Eebe iyo Raacidda Sharcigiisa, iyo u Hogaansan Dhab ah iyo Rumayn Sugan. Al-Furqaan (43-50).

51. Haddaan Doonno waxaan ka Bixin Lahayn Magaalo Kasta Dige (Nabi).

وَلَوْ شِئْنَا لَبَعَثْنَا فِي كُلِّ قَرْيَةٍ نَذِيرًا ﴿٥١﴾

52. ee ha Adeecin Gaalada kulana Jahaad Quraanka Jahaad Weyn.

فَلَا تُطِيعُ الْكَافِرِينَ وَجَاهِدْهُمْ بِهِ جِهَادًا كَاسِيًّا ﴿٥٢﴾

53. Eebe wuu isku daraa Labada Badood, Kaasi waa Macaan Daran, kaasna waa Khadhaadh Daran (Afku Diido) yeelayna Dhexdooda Soohdin iyo Xaajis Awdan.

* وَهُوَ الَّذِي مَرَجَ الْبَحْرَيْنِ هَذَا عَذْبٌ فُرَاتٌ وَهَذَا مِلْحٌ أُجَاجٌ وَجَعَلَ بَيْنَهُمَا بَرْزَخًا وَجِجْرًا مَحْجُورًا ﴿٥٣﴾

54. Eebana waa kan ka Abuuray Biyaha Dad kana Yeelay Qaraabo iyo Soddognimo, Eebahaana wuu karaa (Wuxuu Doono).

وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ مِنَ الْمَاءِ بَشَرًا فِجَعَلَهُ نَسَبًا وَصِهْرًا وَكَانَ رَبُّكَ قَدِيرًا ﴿٥٤﴾

55. waxayna Caabudi Gaaladu Eebe ka Sokow waxaan Anfacyay Dhibayna Gaalna wuxuu ahaaday mid ka soo hor jeeda Eebihis.

وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَنْفَعُهُمْ وَلَا يَضُرُّهُمْ وَكَانَ الْكَافِرُ عَلَى رَبِّهِ ظَهِيرًا ﴿٥٥﴾

56. Maa naan kuu Dirin inaad Bishaareeye Dige ah (Noqoto Mooyee).

وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا مُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿٥٦﴾

57. Waxaad Dhahdaa Idinkama warsaado (Xaqa Gaadhiintiisa) U Juuro Ruuxiise dooni inuu ka Yeesho Eebihis Xaggiisa Waddo (Khayr ha falo).

قُلْ مَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِلَّا مَنْ شَاءَ أَنْ يَتَّخِذَ إِلَىٰ رَبِّهِ سَبِيلًا ﴿٥٧﴾

Ilaahbaa Awoodda leh, hadduu Doonana wuxuu u Diri lahaa Magaalo kasta Nabi, waxayse keentay Xigmadiisu inuu Nabiga u Diro Dadkoo Dhan, Farayna inusan Maqlin Warka Gaalada kulana Jihaado Quraanka iyo Gaadhsiintiisa Xaqa, waana Eebaha ahaysiiyey Badaha, kana yeelay kuwa kala Duwan kalana Jooga, Biyahana ka Abuuray Dad, kana yeelay qaraabo iyo Raxim, Saas Darteedna ayna Habboonayn in wax lala Caabudo Eebe, Gaalase waxay Noqdeen kuwa Shaydaan u Kaalmaystay ka Soo Hor Jeedka Eebe, Nabiguse waa Bishaareeye Digi, wax Ujuuro ahna kama Doono Gaadhiinta Xaqa. Saciid Binu Jubayr wuxuu Yidhi: Gaal wuxuu Noqday u Kaalmeeyaha Shaydaanka Colnimada iyo Gaalimada. Zayd Binu Aslama wuxuu Yidhi: Wuxuu Noqday Xidhiidhiyaha Shaydaanka. Al-Furqaan (51-57).

58. Talo Saaro Eebaha Nool een

وَتَوَكَّلْ عَلَىٰ الْحَيِّ الَّذِي لَا يَمُوتُ وَسَبِّحْ

Dhimanayn una Tasbiixso adoo Mahdin, Eebaana ku Filan Dambiga Adoomadiiisa Ogaanshihiisa.

يَحْمَدُهُ وَكَفَىٰ بِهِ يَذُنُوبَ عِبَادِهِ
حَيْرًا ٥٨

59. waana Eebaha ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka iyo Waxa u Dhexeeya Lix Maalmood, kuna Istawooday Carshiga (Si u Cunanta), ee Warso Cid wax Og.

الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا فِي
سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ اسْتَوَىٰ عَلَى الْعَرْشِ الرَّحْمَنُ فَسَلِّ
بِهِ حَيْرًا ٥٩

60. Marka la Dhaho u Sujuuda (Eebaha) Raxmaan ah waxay Dhahaan Muxuu Yahay Raxmaan, ma waxaan u Sujuudeynaa waxaad na Farayso, wuxuuna u Kordhiyey Carar.

وَإِذْ أَمَرْنَا لَهُمُ اسْجُدُوا لِلرَّحْمَنِ قَالُوا وَمَا الرَّحْمَنُ
أَنْسُجُدْ لِمَا أَمَرْنَا وَرَادَهُمْ نُفُورًا ٦٠

61. Waxaa Khayr Badnaaday Eebaha Yeela Samada Burjiyo Yeelayna Dhexdeeda Siraaj (Qorrax) iyo dayax ifi.

تَبَارَكَ الَّذِي جَعَلَ فِي السَّمَاءِ بُرُوجًا وَجَعَلَ
فِيهَا سِرَاجًا وَقَمَرًا مُنِيرًا ٦١

62. Eebana waa Ilaah uga Yeelay Habeenka iyo Maalinta Isbaddel Ciddii Doonta inuu wax Xusuusto ama Doo-no inuu Mahdiyo.

وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ خِلْفَةً لِمَنْ أَرَادَ
أَنْ يَذَّكَّرَ أَوْ أَرَادَ شُكُورًا ٦٢

Wuxuu Eebe Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Dadka kalana waa la Mide inuu Eebe Talo Saarto Markuu Raaco wuxuu Eebe faray Samayntiisa, Illeen Talo Saarashadu ma aha Seexo ama Sheqada ka Fadhiiso, ee waa in lala Yimaado Asbaabta intaas ka Dibna Eebe la Talo Saarto. Illeen Isagaa Nool oon Dhimanayne, oo Awoodda leh, Mudana Mahad, Waynaya, Cibaado iyo Baryaba, Mana Haboona in layska Kibriyo Sujuuddiisa iyo Cibaadadiisa, Miyuuna Mudanin Waxaas Eebaha Cirka Yeelay Burjiyo, Qorrax iyo Dayax, yeelayna Habeen iyo Dharaar Isbadala, oos ku waano qaato Ciddii wax Xusuusan ama waanaqaadan.

Gaaladii Quresheed way Diidi Jireen Magaca Eebe, ee Raxmaana waxayna Dhihi jireen waa Maxay Raxmaan Markaasaa Eebe ku Ceebiyey Arrintaas. Al-Furqaan (58-62).

63. Addoomada Eebaha Raxmaana waa kuwa u Socda Dhulka Xasillooni, markay la Hadlaan (Af Xumeeyaan) Jaahilliinna Yidhaahda Nabagalyo.

وَعِبَادَ الرَّحْمَنِ الَّذِينَ يَمْشُونَ عَلَى الْأَرْضِ هَوْنًا وَإِذَا
خَاطَبَهُمُ الْجَاهِلُونَ قَالُوا سَلَامًا ٦٣

64. ee ah Kuwa ku Barya (Habeenkii) Iyagoo u Sujuudi oo u Istaagi (Cibaado) Eebe.

وَالَّذِينَ يَبِيتُونَ لِرَبِّهِمْ سُجَّدًا وَقِيَامًا ٦٤

65. ee Ah kuwa Dhihi Ilaahow naga Iil Cadaabka Jahannamo, Cadaabkeedu waa joogtee.

وَالَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا اصْرِفْ عَنَّا عَذَابَ
جَهَنَّمَ إِنَّ عَذَابَهَا كَانَ غَرَامًا ٦٥

66. Iyaduna waxay u Xuntahay ku Sugnaansho iyo ku Nagaadi.

إِنَّهَا سَاءَتْ مُسْتَقَرًّا وَمُقَامًا ﴿٦٦﴾

67. Ee ah kuwa Markay wax Bixiyaan aan Xad gudbin Cidhiidhyinna, oo intaas Dhexdeeda ku Toosnaada.

وَالَّذِينَ إِذَا أَنْفَقُوا لَمْ يُسْرِفُوا وَلَمْ يَقْتُرُوا
وَكَانَ بَيْنَ ذَلِكَ قَوَامًا ﴿٦٧﴾

68. Ee ah kuwaan Caabudayn Eebe La Jirkiisa Ilaah kale, oona Dilayn Naftuu Eebe Xarrimay Dilkeeda Xaq Mooyee oon Zinaysanayn, Ciddii Saas fashana waxay la Kulmi Dambi.

وَالَّذِينَ لَا يَدْعُونَ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ وَلَا يَقْتُلُونَ
النَّفْسَ الَّتِي حَرَّمَ اللَّهُ إِلَّا بِالْحَقِّ وَلَا يَزْنُونَ
وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ يَلْقَ أَثَامًا ﴿٦٨﴾

69. waxaana loo Laab laabi Cadaabka Maalinta Qiyaame wuuna ku Waari Dhexdiisa Isagoo Dullaysan.

يُضَاعَفْ لَهُ الْعَذَابُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَيَخْلُدْ فِيهِ
مُهَانًا ﴿٦٩﴾

70. Ciddii Toobad keenta oo Rumaysa oo Fasha Camal Fiican Mooyee, oo kuwaas waxaa loogu Badali Xumaantooda Wanaag, Eebana waa Dambi Dhaafe Naxariista.

إِلَّا مَن تَابَ وَآمَنَ وَعَمِلَ عَمَلًا صَالِحًا
 فَأُولَئِكَ يُبَدِّلُ اللَّهُ سَيِّئَاتِهِمْ حَسَنَاتٍ
 وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَحِيمًا ﴿٧٠﴾

71. Ruuxii Toobad keena oo Fala Wanaag wuxuu u Noqon Eebe Noqosho.

وَمَن تَابَ وَعَمِلَ صَالِحًا فَإِنَّهُ يَتُوبُ إِلَى اللَّهِ
مَتَابًا ﴿٧١﴾

Isla wayni Islaamku ma Ogala, wuxuuna Fari in Jaahiliinta warkooda layska Dhaafu, Eebana la Caabudo, lagana Magan galo Naarta, oon Nafaqadana lagu Xadgudbin layskuna Cidhiidhyin ee la Dhexdhexeysto, Gaalimana layska Jiro, iyo Dil Naf la Reebay oo Xaq Darro, Zinana Laga Fogaado, waxyaalahaasna waa waxa laab Laaba Cadaabka, Ciddiise Toobadkeenta Eebe wuu ka Aqbali, Xumaantana Wuxuu ugu Badali Wanaag, Tilmaamahaasna waxaa ku Sifooba Mu'miniinta Fiicfiican. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Eebe haw Shariig yeelina, Naf Xaq Darrana Ha dilina, Hana Zinaysanina, Hana Xadina. Waxaa Sheegay Salamo Binu Qays. Al-Furqaan (63-71).

72. (Kuwa Fiican) waa kuwaan Furayn Been, Markay Maqlaan Hadal Xunna Mara iyagoo Wanaagsan (Ka Jeedsa-da).

وَالَّذِينَ لَا يَشْهَدُونَ الزُّورَ وَإِذَا مَرُّوا بِاللَّغْوِ
مَرُّوا كِرَامًا ﴿٧٢﴾

73. waana kuwa marka lagu Waaniyo Aayaadka Eebahooda aan Dhicin Dha-go iyo Indho La'aan.

وَالَّذِينَ إِذَا دُكِرُوا بِعَائِكَ رَبِّهِمْ لَمْ يَجِرُوا
عَلَيْهَا صَبْرًا وَعُغْيَانًا ﴿٧٣﴾

74. waana kuwa Dhihi Eebow nagasii (naga tusi) Haweenkanaga iyo Caruur-

وَالَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا هَبْ لَنَا مِنْ أَزْوَاجِنَا وَذُرِّيَّاتِنَا

tanada wax Ishu ku Qabowsato, noo-gana yeel kuwa Dhawrsada Imaam.

فِرَّةَ أَعْرَبٍ وَجَعَلْنَا لِمَنْ يَشَاءُ إِمَامًا ﴿٧٦﴾

75. Kuwaas waxaa lagu Abaal marin Fooqa (Janno) Samirkoodii Dartiis waxayna kula Kulmi dhexdeeda Salaan iyo soo Dhawayn.

أُولَئِكَ يَجْزُونَ الْعُرْفَةَ بِمَا صَبَرُوا وَيُلْقُونَ فِيهَا حِجَّةً وَسَلَامًا ﴿٧٥﴾

76. Wayna ku waari Dhexdeeda waxaana u Wanaagsan Janada ku Sugnaan iyo Nagaadiba.

خَالِدِينَ فِيهَا حَسَنَاتٌ مُسْتَقَرًّا وَمُقَامًا ﴿٧٦﴾

77. Waxaadna Dhhahdaa Idiinma Aabo Yeeleen Eebahay Haddaydaan Baryeyn (Illeen) waad beeniseen (Xaqee) wuxuuna ahaan mid idin Laasima Beeninta (Ciqaabta).

قُلْ مَا يَعْزُبُ عَن رَّبِّي تَوْلَا دَعَاؤَكُمْ فَقَدْ كَذَّبْتُمْ فَسَوْفَ يَكُونُ لِزَامًا ﴿٧٧﴾

Waxaa ka mid ah Tilmaanta Addoomaha Eebe inay Yihiin kuwaan Joogsan meel Gaalnimo, oon Furinna Been iyo Xumaan, kana Jeedsada waxa Macno Darro, Kasa oo Fahma Aayaadka Ecbe een Garasho la'aan iyo Indho La'aan la Joogin, waana kuwa Ehelkooda Wanaaga La Jeclaada iyo Eebe ka Yaabid, Illeen haddii kale wax kuuma Taraan, kuwaa Toosnaan ee Eebe warsan inuu ka Yeelo Imaamyo lagu Daydo oo Suubaan, kuwaas Jannaa lagu Abaal marin Samirkooda dartiis, waxayna la Kulmi Salaan iyo Soo Dhawayn, iyo ku Sugnaan Meel Fiican, Eebana Ciduu u aaba Yeeli ama Danayn ma jirto Haddayna Caabudin ooyan Baryin, Gaalana Hadday Xaqa Beeniyaan waxaa Haleeli Ciqaabtiisa.

Nabiguna (Nazariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha Yeelee) Wuxuu Yidhi: Maydiinka warramaa ka U wayn Dambi Saddex Goor, waxayna Dhaheen haa, wuxuuna Yidhi: Gaalnimo, Caaqwaalid, iyo Hadalka Beenta ah iyo Maragga Beenta ah, wuuna Cel celiyey Intaan ka Dhahno Muu Aamuso. (Sixix). Al-Furqaan (72-77).



Suurat Ash-Shucaraa'



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. waxay ku Tusin Mucjisada Quraanka sida soo Hor martay.

طَسَمَ ١

2. Taasi waa Aayadihii Kitaabka Cad.

بَلَّغَ آيَاتِ الْكِتَابِ الْمُبِينِ ٢

3. Waxaadna u Dhawdahay Nabiyow inaad Halaagto Naftaada Haddayna Rumayn Xaqa.

لَعَلَّكَ بِنَفْسِكَ أَتَى يَكُفِّرُ بِنَفْسِكَ ٣

4. Haddaan Doono Waxaan kaga soo Dejinaynaa Korkooda Samada Aayad oy Noqoto Luquntoodu Miday u Khus-huucdo.

إِن نَّشَأْنُزِّلَ عَلَيْهِمْ مِنَ السَّمَاءِ آيَةٌ فَظَلَّتْ أَعْيُنُهُمْ لَهَا خَاضِعِينَ ٤

5. Waxkasta oo Quraana oo Uga Yimaadda Xagga Eebaha Raxmaana oo soo Darriyo (Cusboonaada) waxay ahaan kuwo ka Jeedsada.

وَمَا يَأْتِيهِمْ مِنْ ذِكْرٍ مِنَ الرَّحْمَنِ مُحَدَّثٍ إِلَّا كَانُوا عَنْتَهُ مُعْرِضِينَ ٥

6. waxayna Beeniyeen (Xaqa) waxaase u Imaan Warka waxay ku Jees Jee-sayeen.

فَقَدْ كَذَّبُوا فَسَيَأْتِيهِمْ أَنْبَاءُ مَا كَانُوا بِهٖ يَسْتَهْزِئُونَ ٦

7. Miyeyna Arkayn Dhulka Inaan ka soo Bixiino Nooc kasta oo Fiican.

أُولَئِكَ رَوَّاءُ إِلَى الْأَرْضِ كَمَا أَنْشَأْنَا مِنْ كُلِّ رَوْحٍ كَرِيمٍ ٧

8. Taasna waxaa ku sugan Aayad Badankooduna ma aha Mid Rumeyn (Xaqa).

إِنَّا فِي ذَلِكَ لَآيَةٌ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُؤْمِنِينَ ٨

9. Eebahaana Waa Adkaade Naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ٩

Aayaduhu waxay Xoojin oo Calool Adkayn Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeele) iyo in Eebe Awoodda Leeyahay oo waxuu Doono ku soo Dejin karo, waxayse ka Caada yeesheen Gaaladu inay Xaqa Beeniyaan, wayse Ogaan Cidhibta Ariintaas.

Ciddiise waano Qaadan ha Daydo Dhulka iyo waxa Eebe ka soo Bixiyo oo ah Wax lagu Waano Qaato. Shaabi Wuxuu Yidhi: Dadka waxaa laga Abuuray Dhulka Ciddii Jannada Gashana waa mid Fiican, Kii Naarta Galana waa Mid Xun. Ash-Shucaraa' (1-9).

10. (Xusuuso) markuu ugu Yeedhay Eebahaa (Nabi) Muuse inuu Aado Qoomka Daalimiinta ah. وَلِذَٰلِكَ نَادَىٰ رَبُّكَ مُوسَىٰ أَنِ أَنْتَ الْغَلَامِيبِ ۝١٠
11. Qoomka Fircoon, Maydhawrsadaan. قَوْمَ فِرْعَوْنَ ۗ أَلَا يَتَّقُونَ ۝١١
12. Wuxuu Yidhi (Nabi) Muuse Eebow waxaan ka Cabsan inay I beeniyaan. قَالَ رَبِّ إِنِّي أَخَافُ أَنْ يُكَذِّبُونِ ۝١٢
13. Ooy Cidhiidhyanto Laabtaydu Siina Daysmin Carrabkaygu ee Dir la Jirkayga Haaruun. وَيَضِيقُ صَدْرِي وَلَا يَبْسُطُ لِسَانِي فَأرْسِلْ إِلَىٰ هَٰؤُلَاءِ ۝١٣
14. waxayna igu Leeyihiin Dambi (Godob) waxaana ka Cabsan inay I dilaan. وَلَهُمْ عَلَيَّ ذَنْبٌ فَأَخَافُ أَنْ يَقْتُلُونِ ۝١٤
15. Wuxuu Yidhi Ilaahay saas ma aha ee La aada Aayaadkanaga, Anagaa Idinla Jirra Maqlina. قَالَ كَلَّا فَاذْهَبَا بِآيَاتِنَا إِنَّا مَعَكُمْ مُسْتَمِعُونَ ۝١٥
16. ee u Taga Fircoon una Dhaha Annagu waxaan Nahay Rasuulka Eebaha Caalamka. فَأْتِيَا فِرْعَوْنَ فَقُولَا إِنَّا رَسُولُ رَبِّ الْعَالَمِينَ ۝١٦
17. Ee Dir «u Ogolow» Banii Israa'iil la jirkannaga. أَنْ أَرْسِلَ مَعَنَا بَنِي إِسْرَائِيلَ ۝١٧
18. Wuxuu Yidhi (Fircoon) Miyaanaan kugu Barbaarinin Dhexdanada Adoo Yar oodan ku Nagaanin Dhexdanada Cimrigaaga Sanooyin. قَالَ أَلَمْ نُرَبِّكَ فِيمَا تَأْوِيلُهُ أَلَمْ نَكُنْ فِيمَا مِنْ مُنْمَرِكَ سَيِّئِينَ ۝١٨
19. Ood Fashay Arrintaad Fashay Adoo Diidan (Sama Falkii). وَفَعَلْتَ فَعَلَكَ الْآلِي فَعَلْتَ وَأَنْتَ مِنَ الْكَافِرِينَ ۝١٩
20. Wuxuu Yidhi (Nabi) Muuse waan Falay Anoon Wax kasayn. قَالَ فَعَلْتُهَا إِذَا وَأَنَا مِنَ الضَّالِّينَ ۝٢٠
21. waana Idinka Cararay Markaan Idinka Cabsaday Markaasuu Eebe I siiyey Nabinimo, Igana Yeelay kuwa La Diray (Rasuul). فَقَرَّرْتُ مِنْكُمْ لَمَّا خِفْتُمْ وَهَبَّ لِي رِيحٌ حَكِيمًا وَجَعَلَنِي مِنَ الْمُرْسَلِينَ ۝٢١
22. Taasise ma Nicma aad igu Mannay-sanbaa Haddaad Addoonsatay Banii Israaa'iil. وَتِلْكَ نِعْمَةٌ تَمُنُّهَا عَلَيَّ أَنْ عَبَّدتَّ بَنِي إِسْرَائِيلَ ۝٢٢

Waxbadan yuu Eebe ka Warramay Siduu u Diray Nabi Muuse iyo siduu u Beeniyey Fircoon iyo wixii Dhexmaray, iyo Say u Doodeen, Dood Xaq iyo Run ah oo Nabi Muuse iyo Dood Kibir iyo Been ah oo Fircoon, waxaase hadhay Xaqii, waxaana Tegay oo Halaagsamay Xumaantii iyo Isla waynidii, waana Sidaa Waligeed Xaqa iyo Baadilka iyo Kibirka. Ash-Shucaraa' (10-22).

23. Fircoon wuxuu Yidhi waa maxay Eebaha Caalamka.

قَالَ فِرْعَوْنُ وَمَا رَبُّ الْعَالَمِينَ ﴿١٣﴾

24. Wuxuu Yidhi (Nabi) Muuse waa Eebaha Samooyinka iyo Waxa u Dha-xeeya haddaad wax Yaqiinsanaysaan (Ruumaynaysaan).

قَالَ رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا إِنَّ كُنتُمْ مُؤَقِنِينَ ﴿١٤﴾

25. Wuxuu ku Yidhi (Fircoon) kuwii Gaararkiisa ahaa War ma Maqlaysaan.

قَالَ لِمَنْ حَوْلَهُ أَلَا تَسْتَمِعُونَ ﴿١٥﴾

26. Wuxuu Yidhi Nabi Muuse waa Eebihiiin iyo Eebaha Aabayaalkiinii Hore.

قَالَ رَبُّكُمْ رَبُّ آبَائِكُمْ الْأَوَّلِينَ ﴿١٦﴾

27. Wuxuu Yidhi Fircoon Rasuulkiinna laydiin soo diray waa Waalanyahay.

قَالَ إِنَّ رَسُولَكُمْ الَّذِي أُرْسِلَ إِلَيْكُمْ لَمَجْنُونٌ ﴿١٧﴾

28. Wuxuu Yidhi Nabi Muuse waa Eebaha Bari iyo Galbeed iyo Waxa u Dhaxeeya Haddaad wax kasaysaan.

قَالَ رَبُّ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ وَمَا بَيْنَهُمَا إِنَّ كُنتُمْ تَعْقِلُونَ ﴿١٨﴾

29. Wuxuu Yidhi Fircoon haddaad Yeelato Ilaah iga soo Hadhay waxaan kaa Yeeli kuwa Xabbisan.

قَالَ لَيْنَ اتَّخَذَتِ الْهَالِكَةُ لِيَأْتِيَنَّكَ مِنَ الْمَسْجُونِينَ ﴿١٩﴾

30. Wuxuu Yidhi Nabi Muuse Haddaan kuula Imaaddo wax Cadna.

قَالَ أَوْ لَوْ جِئْتَنَا بِبَنِي مُؤْمِنِينَ ﴿٢٠﴾

31. Wuxuu Yidhi Fircoon la Imow Haddaad Run Sheegi.

قَالَ قَاتِلْ بِهِ إِنْ كُنتَ مِنَ الصَّادِقِينَ ﴿٢١﴾

Wali waxaa Socda Dooddii Xaqa iyo Baadilka, Xaquu u Yeedhi Nabi Muuse Amar Eebe iyo Baadil uu Hogaamin Fircoon Waswaasin Shaydaan iyo kibir iyo Isla waynaan wax ka Jirin, sidaasayna Had iyo Jeer u Loolamaan Xaqa iyo Baadilku, waxaase la rabaa Mu'minka dhabta ah inuu ku Sugnaado Xaqa uguna Yeedho Dadka si Cad oon Qallooc, Caytan iyo Af lagaado Lahayn, Bal day Hadalka Nabi Muuse iyo Fircoon Hadalkiisa, waa Waano, Is farid iyo Run Nabi Muuse, iyo Af Xumo iyo Caytan Fircoon Faafin, Taasina waxay wax Tusaalayn kuwa Xaqa fari oo Wanaagga U Yeedhi.

Ash-Shucaraa' (23-31).

32. Markaasuu Tuuray Nabi Muuse Ushiisii waxayna Noqotay Mas Muuq-da.

فَأَلْقَى عَصَاهُ فَإِذَا هِيَ ثُجْبَانٌ مُّبِينٌ ﴿٢٢﴾

33. Wuxuuna Siibay Gacantiisa waxay-na ahaatay mid u Cad Dadka Dayi. وَتَرَعَّ يَدُهُ، فَإِذَا هِيَ بَيْضَاءُ لِلتَّنظِيرِ ۝٣٣
34. Wuxuu ku yidhi (Fircoon) kuwii Gaararkiisa ahaa kani waa Sixirre Xeel Dheer. قَالَ لِلْمَلَاحِظَةِ إِنَّ هَذَا لَسِحْرٌ عَلِيمٌ ۝٣٤
35. Doonina Inuu Idinkaga Bixiyo Dhulkiinna Sixirkiisa ee Maxaad Faraysaan. يُرِيدُ أَنْ يُخْرِجَكُمْ مِنْ أَرْضِكُمْ بِسِحْرِهِ فَمَاذَا تَأْمُرُونَ ۝٣٥
36. waxay Dheheen Dib u dhig Isaga iyo Walaalkiis (Xaalkooda) una Dir Magaalooyinka kuwo soo Kulmiya. فَأَلُوهُنَّ وَأَخَاهُ وَأَعْتَفَ فِي الْمَدَائِنِ حَشِيرِينَ ۝٣٦
37. Ha kuu Keeneen Sixirre kasta oo Xeel Dheer. يَأْتُونَكَ بِكُلِّ سِحْرٍ عَلِيمٍ ۝٣٧
38. waxaana Loo kulmiyey Saaxiriintii Imaatin Maalin la Yaqaan. فَجُمِعَ السَّحَرَةُ لِمِيقَاتِ يَوْمٍ مَعْلُومٍ ۝٣٨
39. waxaana Loo Yidhi Dadkii ma Kulmaysaan. وَقِيلَ لِلنَّاسِ هَلْ أَنْتُمْ مُجْتَمِعُونَ ۝٣٩
40. Inaan Raacno Saaxiriinta Hadday Adkaadaan. لَعَلَّآ تَتَّبِعَ السَّحَرَةَ إِنْ كَانُوا هُمْ الْعَالِيِينَ ۝٤٠

Nabi Muuse wuxuu Eebe ku Xoojiyey Mucjisado, sida Usha, Gacanta Nuuri, iyo kuwo kale, Fircoonse wuu ka Madax adaygay, oo Diiday xaqa, Isagoo u Tusin Qoomkiisii in (Nabi) Muuse Xumaan iyo Dhulkooos ka Bixiyo Wado, isuna Ekeysiiyey inuu ku Xidhanyahay Hadalkooda iyo Ra'yigooda, oyna wax Faraan si uu ugu Tallabsado Maslaxadooda, Iyaguna waxay kula arrimiyeen in Xaalka Dib Loo Dhigo, Dadna loo diro Magaalooyinka si ay u Soo kulmiyaan kuwa Sixirka aad u Yaqaan, waana la soo Kulmiyey Saaxiriintii, Dadkiina way soo Kulmeen si ay u Raacaan Saaxiriinta Hadday Adkaadaan. Maxaase Dhacay, waa waxay ka Warrami Aayadaha Soo socda, kana warrameen kuwo Badan. Fircoon Warkiiisu waa Badanyahay, waxaase la Yaab leh inuu Noqdo mid Xaqa Ilaalin oo Maslaxadda Dadkiisa Dhowri, kuna Xidhan Hadalkooda iyo Amarkooda, Dhabshe ma aha Taasi. Ash-Shucaraa' (32-40).

41. Markay Yimaaddeen Saaxiriintii waxay ku Dheheen Fircoon Ujuuro ma Leenahay Haddaan Adkaanno. فَلَمَّا حَآءَ السَّحَرَةُ قَالُوا لِفِرْعَوْنَ أَإِن لَّنَا أَجْرٌ إِنْ كُنَّا نَحْنُ الْعَالِيِينَ ۝٤١
42. Wuxuuna Yidhi haa Waxaadna Noqonaysaan kuwa ii dhow. قَالَ نَعَمْ وَإِنَّكُمْ إِذًا لَمِنَ الْمُقَرَّبِينَ ۝٤٢
43. Wuxuu ku Yidhi (Nabi) Muuse Tuura waxaad Tuuraysaan. قَالَ لَهُمْ مُوسَى الْقَوْمَ أَمَنَ أَنْتُمْ فُلُقُونِ ۝٤٣
44. Waxayna Tuureen Xadhkahoodii فَالْقَوْمُ إِجْبَاءُ لَهُمْ وَعَصِيَهُمْ وَقَالُوا لِعِزَّةِ فِرْعَوْنَ إِنَّا

iyo Ulahoodii waxayna Dheheen Sha-
rafta Fircoon yaan ku dhaarannaye
Anagaa adkaan.

لَتَحْنُ الْعَالِيُونَ ﴿٤٤﴾

45. Markaasuu Tuuray (Nabi) Muuse
Ushiisii waxayna Ahaatay mid Gurata
waxay Dhoodhooben.

فَأَلْفَى مُوسَى عَصَاهُ فَإِذَا هِيَ تَلْقَفُ مَا يَأْفِكُونَ ﴿٤٥﴾

46. waxaana la Riday Saaxirintii Sujuud
Darteed.

فَأَلْفَى السَّحْرَةَ سَلْجِدِينَ ﴿٤٦﴾

47. Waxayna Dheheen waxaan Rumay-
nay Eebaha Caalamka.

فَأَلْوَاءَ امْتَارِبِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٤٧﴾

48. Eebaha (Nabi) Muuse iyo (Nabi)
Haaruun.

رَبِّ مُوسَى وَهَارُونَ ﴿٤٨﴾

Saaxiriintii Markay ka Yimmaaddeen Masar Jahooyinkeeda iyagoo ah kuwo ugu Sixir badan, ahna Dad Badan yey Wayddiisteen Fircoon Abaal Gud hadday Adkaadaan, wuuna u Ballan qaaday inuu Abaal Mariyo, wuxuuna ugu Deeqay inay Noqdaan kuwa u Dhow ee Agtiisa Jooga, wayna Tuureen waxay soo Dhoodhooben oo Sixir ah, iyagoo ku Dhaartay Fircoon inay Adkaan, wayse Beenowday Dhaartii, waxaana Cuntay waxay wateen Ushii Nabi Muuse, Markaasay Garteen inay Xumaan ku Socdeen, wayna Toobad keeneen, iyagoo Rumeeyey Eebe iyo Xaqay la Yimaadeen Nabi Muuse iyo Nabi Haaruun.

Saasuuna u Sarreeyey Xaqii Una Buray Sixirkoodii Loogana Adkaaday Fircoon iyo Colkiisii. Xujada Cad ee Xaqaba way Jabisaa Xumaaanta iyo Baadilka had iyo Jeer. Ka Dhawrsasho iyo Sharaf iyo ku Dhaarashana waynaa Muta Eebe Sarreeye. Ash-Shucaraa' (41-48).

49. Wuxuu yidhi Fircoon Miyaad Ru-
meyseen Muuse ka Hor Idankayga,
Isagu waa kan idiinku wayn ee idin
Baray Sixirka waadse Ogaan doontaan,
waxaana u Goyn Gacmahiinna iyo
Lugahiinna Isdhaaf, waana idin Wadhi
Dhammaantiin.

قَالَ أَمْ شِئْتَهُ رَبِّ قَبْلَ أَنْ أَدْرَكَ لَكَ إِتَهُ لَكَ يَوْمَ الَّذِي
عَسَاكَ السِّحْرَ فَلَسَوْفَ نَعْلَمُونَ لَا أَطْعَمَ أَيْدِيكَ
وَأَرْجَلُكَ مِنْ خَلْفٍ وَلَا صَبَّتُكَ أَحْمِيمِينَ ﴿٤٩﴾

50. Waxayna dhaheen Dhib ma leh
annagu Xagga Eebahannaan u Noqo-
naynaa.

قَالُوا لَأَصْبِرَنَّ إِنَّا إِلَى رَبِّنَا مُنْقَلِبُونَ ﴿٥٠﴾

51. waxaana Dalbaynaa (Damcaynaa)
inuu noo Dhaafo Eebahanno Gafafka-
naga Inaan Noqonay kuwii ugu Hor
Rumeeyey (Xaqa).

إِنَّا نَطْمَعُ أَنْ يَغْفِرَ لَنَا رَبُّنَا خَطِيئَاتِنَا إِنَّ كُنَّا أَوَّلَ
الْمُؤْمِنِينَ ﴿٥١﴾

52. Waxaan u waxyoonay Nabi Muuse
Guuri Addoomadayda waa Laydin
Raaciye.

* وَأَوْحَيْنَا إِلَى مُوسَى أَنْ أَسْرِ بِعَادِي إِنَّهُمْ
مُتَّبِعُونَ ﴿٥٢﴾

53. Markaasuu u Diray Fircoon Ma-gaalooyinka kuwo Soo kulmiya.

فَأَرْسَلَ فِي رَسُولٍ فِي الْمَدَائِنِ حَاشِرِينَ ﴿٥٣﴾

54. Isagoo dhihi Kuwaasu «Banii Is-
raa'iil» waa Koox Yar.

إِنَّ هَؤُلَاءِ لَشِرْذِمَةٌ قَلِيلُونَ ﴿٥٤﴾

55. Wayna Na cadho Galiyeen.

وَأَنهَمُ لَنَا لَقَائِطُونَ ﴿٥٥﴾

56. Waxaana nahay kuwo Had iyo Jeer
Digtoon.

وَأَنَا الْجَمِيعُ حَذِرُونَ ﴿٥٦﴾

57. Waxaana ka Bixinnay Beero iyo
(Biyo) ilo.

فَأَخْرَجْنَا مِنْ جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ ﴿٥٧﴾

58. Iyo Kanziyo iyo Nagaadi Fiican.

وَكُنُوزٍ وَمَقَابِرَ كَرِيمٍ ﴿٥٨﴾

59. Waxaana Dhaxalsiinay Banii Is-
raa'iil.

كَذَلِكَ وَأَوْرَثْنَاهَا بَنِي إِسْرَائِيلَ ﴿٥٩﴾

Xaqiibaa Cadaaday, Fircoonse waa inuu Qariyo Jabkiisa, wuxuuna isku Rogay Colkuu soo Doortay kuna Tuhmay inay Shirqoolayaan, oy Muuse wax la Hayeen, wuuna Hadiday inuu Layn, waxbase kama tarin, Illeen Xaqay Rumeeyeene, Eebana wuxuu Faray Nabi Muuse inuu la Guuro Inta Rumaysay, Fircoonna waa Raacay Isagoo soo Kulmiyey Colkiisii, Marna Hadidi Muuse iyo Intii Rumaysay, Mana Faa'iidin, Waxayse ku Dhammaatay in la Halaago Siday Aayaduhu Sheegi. Ash-Shucaraa' (49-59).

60. Markaasay Raaceen (ka daba Duu-
leen) Qorrax soo Bixii.

فَاتَّبَعُوهُمْ مُشْرِقِينَ ﴿٦٠﴾

61. Markay isu Muuqdeen Labadii
Kooxood waxay Dheheen Asaxaabtii
Nabi Muuse Inaga waa Layna Halee-
lay.

فَلَمَّا تَرَى الْجَمْعَانَ قَالَ أَصْحَابُ مُوسَى إِنَّا
لَمَذْرُؤُونَ ﴿٦١﴾

62. Wuxuuna Yidhi (Nabi) Muuse Saas
ma aha ee Eebahaybaa Ila jira wuuna i
Toosin.

قَالَ كَلَّا إِنَّ مَعِيَ رَبِّي سَيَهْدِينِ ﴿٦٢﴾

63. Waxaana u Waxyoona (Nabi)
Muuse ku Garaac Ushaada Badda
wayna kala Jeexantay Baddii wuxuuna
Noqday Jeex kasta Buur wayn oo kale.

فَأَوْحَيْنَا إِلَى مُوسَى أَنْ أَضْرِبْ بِعَصَاكَ الْبَحْرَ
فَأَنفَلَقَ فَكَانَ كُلُّ فِرْقٍ كَاطَّةٍ عَلَى الْآخَرِ ﴿٦٣﴾

64. Waana ku soo Dhawaynay Halkaas
kuwii kale (Colkii Fircoon).

وَأَرْزَقْنَاهُمَا الْآخَرِينَ ﴿٦٤﴾

65. Waxaana Korinay (Nabi) Muuse
iyo Intii la Jirtay Dhammaan.

وَأَنجَيْنَا مُوسَى وَمَنْ مَعَهُ أَجْمَعِينَ ﴿٦٥﴾

66. Ka dibna waxaan Maanshaynay
Kuwii kale.

ثُمَّ أَعْرَفْنَا الْأَخْرَبِينَ ﴿٦٦﴾

67. Arrintaasna waxaa ku Sugaan Aayad
Mana aha Badankood kuwo Rumeeyn.

إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ
مُؤْمِنِينَ ﴿٦٧﴾

68. Eebahaana waa Adkaade Naxariis-
ta.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ﴿٦٨﴾

Waxay Sheegeen Fasirayaashu in Fircoon la Baxay Col wayn oo ka Kooban Madaxdii iyo Askartii. Aayaduhuna waxay noo Sheegeen in markay isku Dhawaadeen Labadii Col oy ku Calaa caleen Dad ka Mid ah Qoomkii Nabi Muuse in la Haleelay, wuxuuse ku Kalsoonaa Ilaahiis inuu Toosin, wuxuuna U waxyooday inuu Badda Garaaco, oyna kala Jeexantay, Fircoon iyo Colkiisina lagu soo Dhaweeyey, lana Koriyey (Nabi) Muuse iyo Intii la jirtay, lana Halaagay oo Lammansheeyey Fircoon iyo Colkiisii, Taasina waa Calaamad lagu Waano Qaato.

Wuxuu wariyey Ibnu Abii Xaatum in Markuu Nabi Muuse Gaadhay Badda ku Baryey Eebe: Ilaaha ahaa wax kasta Hortiis oo ahaysiiyey wax kastoow, oo ahaan wax kasta Gadaashiisow, Nooyeel Faraj. Markaasuu Eebe u Waxyooday Garaac Badda, Wana Taas ku Xidhnaanta Eebe iyo Rumayntiisu. Ash-Shucaraa' (60-68).

69. Ku Akhri Korkooda Warkii Nabi
Ibraahim.

وَأَنْزَلْنَا عَلَيْهِمْ نَبَأَ إِبْرَاهِيمَ ﴿٦٩﴾

70. Markuu ku Yidhi Aabihiis iyo
Qoomkiisii maxaad Caabudaysaan.

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِ مَا تَعْبُدُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxay Dheheen waxaannu Caabudi
Sanamyoo oonu ahaan kuwo ku Nagaada.

قَالُوا تَعْبُدُونَ أَصْنَامًا فَظَلُّوا لَهَا عَافِيَةً ﴿٧١﴾

72. Wuxuu Yidhi (Nabi Ibraahim)
Maydin Maqlayaan markaad Baryey-
saan.

قَالَ هَلْ يَسْمَعُونَكُمْ إِذْ تَدْعُونَ ﴿٧٢﴾

73. Mase idin Anfaci ama idin Dhibi.

أَوْ يَسْمَعُونَكُمْ أَوْ يَضُرُّونَ ﴿٧٣﴾

74. Waxay Dheheen waxaan Hella
Aabayaalkanno oo Sidaas Fali.

قَالُوا بَلْ وَجَدْنَا آبَاءَنَا كَذَلِكَ يَفْعَلُونَ ﴿٧٤﴾

75. Wuxuu Yidhi Bal Warrama waxaad
Caabudaysaan.

قَالَ أَفَرَأَيْتُمْ مَا كُنْتُمْ تَعْبُدُونَ ﴿٧٥﴾

76. Idinka iyo Aabayaalkiinii Hor-
reeyey.

أَنْتُمْ وَآبَاؤُكُمْ الْأَقْدَمُونَ ﴿٧٦﴾

77. Hadday Iyagu Col ii Yihiin Eebaha
Caalamka Mooyee.

فَالَهُمْ عَذَابٌ فِي الْأَرْبَابِ الْعَالَمِينَ ﴿٧٧﴾

Aayadahani waxay ka warrami Addoonkii Eebe iyo Rasuulkiisii ahaa Imaamka kuwa Toosan Nabi Ibraahim, wuxuuna Eebbe Faray Rasuulkiisa Muxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu ku Akhriyo Umaddiisa inay ku Daydaan, Kali Yeelidda Cibaadada, Tala Saarashada Eebe, ka fogaanshaha Gaalimada, Illeen Eebaa siiyey Hanuun iyo Wannag uu ku Diray waxay Caabudi Jireen Qoomkiisii, Isagoo u Sheegay inayan wax Tarayn Cibaado waxaan ku Maqlayn, waxna Anfacayn, waxaase wax la Caabudo oo laysku halleeyo ah Eebaha Caalamka ee Awoodda leh, Tan kale Walaalnimadu waa Tan Iimmanka iyo Islaanimada, wixii ka Soo Hadhayse waa Col aan Heshiis lahayn. Ash-Shucaraa' (69-77).

78. Ee Eebaha I Abuuray ee ah kan I Hanuunin.

الَّذِي خَلَقَنِي فَهَوَّيْدِينِ ﴿٧٨﴾

79. Kan I Quudin ee I Waraabin.

وَالَّذِي هُوَ يُطْعَمُنِي وَيَسْقِينِ ﴿٧٩﴾

80. Markaan Bukoodana Isagaa I Caafiya.

وَإِذَا مَرِضْتُ فَهُوَ يَشْفِينِ ﴿٨٠﴾

81. Waana kan I dili Ina Noolayn.

وَالَّذِي يُمَسِّئُنِي ثُمَّ يُجْبِينِ ﴿٨١﴾

82. Ee ah kaan Damci inuu Ii Dhaafo Gafafkayga Maalinta Abaal marinta.

وَالَّذِي أَطْمَعُ أَنْ يَغْفِرَ لِي خَطِيئَتِي يَوْمَ الدِّينِ ﴿٨٢﴾

83. Eebow i Sii Xikmo (Nabinimo) Ina Haleeshii kuwa Suuban.

رَبِّ هَبْ لِي حُكْمًا وَأَلْحِقْنِي بِالصَّالِحِينَ ﴿٨٣﴾

84. Iina Yeel Sheegid Run ah (Fiican) kuwa Dambe.

وَأَجْعَلْ لِي لِسَانَ صِدْقٍ فِي الْآخِرِينَ ﴿٨٤﴾

85. Igana yeel kuwa Dhaxli Janada Naciimo.

وَأَجْعَلْنِي مِنْ رِثَةِ جَنَّةِ النَّعِيمِ ﴿٨٥﴾

86. Una Dambi Dhaaf Aabahay wuxuu ka Mid ahaa kuwa Dhumaye.

وَأَغْفِرْ لِي إِنِّي أَنَا مِنَ الضَّالِّينَ ﴿٨٦﴾

87. Hana i Dullayn Maalinta la Soo Bixin (Dadka).

وَلَا تُخْزِنِي يَوْمَ يُبْعَثُونَ ﴿٨٧﴾

88. Maalintayna wax Anfacyayn Xoolo iyo Ilmo midna.

يَوْمَ لَا يَنْفَعُ مَالٌ وَلَا بَنُونَ ﴿٨٨﴾

89. Ruux ula Yimaadda Eebe Qalbi Fayow Mooyee (Iimaan).

إِلَّا مَنْ أَى اللَّهُ يَقْلِبْ سَلِيمٍ ﴿٨٩﴾

Eebaa wax Abuura, waxna Hanuuniya, waxna Quudiya, oo Waraabiya, Isagaana wax Caafiya, waxna Dila, waxna Nooleeya, Dambigana u Dhaafa Mu'miniinta, Saas Darteed Yuu Nabi Ibraahim u Warsaday inuu Xikmo oo ah Cilmi, Nabinimo iyo Wanaag siiyo. Dadkii Fiicana Raaciyoo Ammaan iyo Qaddarina Ugu yeelo Dadka Dambe, kana Yeelo kuwa Dhaxli Jannada, una Dambi Dhaafo Aabihiis Illeen wuxuu ka Mid ahaa kuwa Dhumaye, waxayna ahayd intayna u Cadaan, iyo Inuusan Dullayn Maalinta Dadka la soo Bixin, oon Xoolo iyo Caruur wax tarayn, ee Camal Fiican iyo Qalbi Nabadgalay kaliya wax tari.

Siciid Binu Musayib wuxuu Yidhi: Qalbiga Nabadgalay waa kan Fayow, waana Qalbiga Mu'minka. Illeen Qalbiga, Gaalka iyo Munaafagu waa Bukaayee. Waana Taas ku Xidhnida Eebe iyo Aqoonsigiisu. Ash-Shucaraa' (78-89).

90. Waana loo Dhawayn Jannada kuwa Dhawrsada (Mu'miniinta Dhabta ah). وَأَزَلَّتْ الْجَنَّةُ لِلْمُنَافِقِينَ ﴿١٠﴾
91. Waana Loo Muujin Jaxiimo kuwa Baadiyoobay. وَبُرُزَّتْ الْجَحِيمُ لِلْغَاوِينَ ﴿١١﴾
92. Waxaana Lagu Dhihi Aaway wa-xaad Caabudayseen. وَقِيلَ لَهُمْ إِنَّا مَا كُنْتُمْ تَعْبُدُونَ ﴿١٢﴾
93. Oo Eebe ka soo Hadhay Maydiin Gargaarayaan ama Gargaarsanayaan. مِنْ دُونِ اللَّهِ هَلْ يَنْصُرُونَكَ أَوْ يَنْصُرُونَ ﴿١٣﴾
94. Waana lagu Hambooriyey (Tuuri) Dhexdeeda iyaga iyo kuwa Baadiyoobay. فَكَيْفَ يُؤْفِكُهُمْ وَالْقَاوِينَ ﴿١٤﴾
95. Iyo Junuudda (Askarta) Ibliis Dhaamaan. وَجُودُ ابْتِلَىٰسَ أَجْمَعُونَ ﴿١٥﴾
96. Waxayna odhan iyagoo Dhexdeeda ku doodi. قَالُوا وَهُمْ فِيهَا يَخْتَصِمُونَ ﴿١٦﴾
97. Eebaan ku Dhaaranaye waxaan ku Sugnayn Baadi Cad. تَاللَّهِ إِن كُنْتُمْ لِي صَالِحِينَ ﴿١٧﴾
98. Markaan Idilla Sinay Eebaha Caalamka. إِذْ نَسُوا كُرْسِيَّ الْعَالَمِينَ ﴿١٨﴾
99. Wax na Dhumiyyey oon Dambiila Yaasha ahayn ma Jiro. وَمَا أَصَلْنَا إِلَّا الْمُجْرِمُونَ ﴿١٩﴾
100. Mana Lihin wax Noo Shafeeca. فَالْتَأَمِنَ شَافِعِينَ ﴿٢٠﴾
101. Iyo Saaxiib Dhaw. وَلَا صِدْقَ عَجْمِينَ ﴿٢١﴾
102. Ee haddaan Noqonno oon Ahaanno Mu'miniin. فَلَوْ أَن لَتَاكُرَهُ فَنُكُونُ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٢٢﴾
103. Taas waxaa ku Sugan Calaamad Badankoodna ma Rumeeyo (Xaqa). إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿٢٣﴾
104. Eebahaana waa Adkaade Naxariista. وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ﴿٢٤﴾

Qiyaamada Xaalkeedu waa Daranyahay sida Wax Badan Quraanku ka Warramay Jahannamana waxaa loo soo Dhawayn Ibliis Gaalo iyo Inta Raacdayna Naartaana lagu Tuuri, oyna ku Murmi Dhexdeeda iyagoo Calaacali oo Qiran Xumaantii iyo Dambigii, wax U gargaari iyo wax u Shafeecina ma jiro, Waqtigaas oo kalena Calaacal wax ma Taro ee waxaa was Tara Iimaan iyo Wanaag hor marsasho. Ash-Shucaraa' (90-104).

105. Waxay Beeniyeen Qoomkii (Nabi) Nuux Rasulladii.

كَذَّبَتْ قَوْمُ نُوحٍ الْمُرْسَلِينَ ﴿١٠٥﴾

106. Markuu ku Yidhi Walaalkood Nuux Miyeydaan Dhawrsanayn.

إِذْ قَالَ لَهُمُ أَخُوهُمْ نُوحٌ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٠٦﴾

107. Anigu waxaan idiin ahay Rasuul Aamin ah.

إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿١٠٧﴾

108. Ee ka Dhawrsada Eebe ina Adeeca.

فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا ﴿١٠٨﴾

109. Idinkana Warsanmaayo (Xaqa) Ujuuro, Ajrigayga Eebaha Caalamkaan ka Sugi.

وَمَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿١٠٩﴾

110. Ee Eebe ka Dhawrsada ina Adeeca.

فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا ﴿١١٠﴾

111. Waxay Dheheen ma waxaanu ku Rumayn adooy ku Raaceen kuwa Dullaysan (Xun Xun).

* قَالُوا أَتُؤْمِنُ لَكَ وَتَتَّبَعَكَ الْأَرْذَالُونَ ﴿١١١﴾

112. Wuxuu Yidhi Maxaan ka Ogahay Waxay Fali.

قَالَ وَمَا عَلِمِي بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١١٢﴾

113. Xisaabtooda Eebe unbaa leh hadaad wax Garanaysaan.

إِنْ حَسَابُهُمْ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّي لَوْلَاشِعْرُونَ ﴿١١٣﴾

114. Aniguna ma Eryayo Mu'miniinta.

وَمَا أَنَا بِطَارِدِ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١١٤﴾

115. Waxaan u Dige Cad ahayna ma ihi.

إِن أَنَا إِلَّا نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿١١٥﴾

Qisada Nabi Nuux horaan u soo Sheegnay wayna Imaandoontaa, waxyaalaha ay halkan Taabatay waxaa ka Mid ah Caqli Xumida Gaalada iyo inay Dadka ku Qiimeeyaan Xoolaha iyo Muuqaalka, tan kale in Xaqa loo Simanyahay Cid Gaar loogu Dhaqaalayna ayna jirin, Ajriga iyo Abaal Marinta Xaq u Yeedhayaashana Eebaa leh, Illeen Abaal Marin Adduun wax kuuma Tartee, Taasna waxay ku Tusin in Ciddii wax Bari Dadka oo Xaqa Tusi Looga baahanyahay inay Dhawraan Caddaaladda iyo ku Xidhnaanta Eebe. Ash-Shucaraa' (105-115).

116. Waxay Dheheen Haddaadan Joojin Nuuxow Waxaad Noqon kuwa la Dhagaxyeyo.

قَالُوا لَيْنَ أَوْ تَتَّبَعْتَهُ يَكْفُرْ أَتَكْفُرُونَ ﴿١١٦﴾

117. Wuxuuna yidhi Eebow Qoomkaygii waa I beeniyeen.

قَالَ رَبِّ إِنَّ قَوْمِي كَذَّبُونِ ﴿١١٧﴾

118. Ee Nakala Xukun Dhexdanada,

فَأَفْسَحْ بَيْتِي وَيَنْشُرْ لِي فَتْحًا وَيَخُنِّي وَمَنْ مَعِيَ مِنْ

ina kori Ani iyo Inta ila jirta ee Mu'miniinta ah.

﴿الْمُؤْمِنِينَ﴾

119. Waxaannu ku Korinay Isaga iyo intii la Jirtay Doontii Buuxday.

﴿فَأَنبِئْهُمْ وَمَنْ مَعَهُ فِي الْفُكِّ الْمَسْحُونِ﴾

120. Ka Dibna waxaan Maanshaynay kuwii Hadhay (Gaaladii).

﴿فَرَأَوْهَا بَعْدَ الْبَاقِينَ﴾

121-Taasna waxaa ku Sugaan Calaamad mana aha Badankoodu kuwo Rumayn.

﴿إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَتَىٰ رَبَّهُمْ مَوْمِنِينَ﴾

122. Eebahaana waa Adkaade Naxariista.

﴿وَأَنَّ رَبَّكَ لَهْوَالْعَزِيضِ الرَّحِيمِ﴾

Markuu Nabi Nuux u Yeedhay Qoomkiisii Habeen iyo Dharaarba, Muddo Dheerna la Noolaa Diideenna Xaqii Yey Goosteen Caadadii Xumayd ee Xaqdiidayaasha oo ah inay la Dagaalamaan Nabigaas Wanaagga Fari, Waxayna ku Hadideen inay Dhagax la Dhici Hadduusan Joogin, Joojinna Xaq u Yeedhidda, Eebaase kala Xukumay oo Koriyey Nuux iyo Mu'miniintii la Jirtay, Halaagayna Gaaladii Xaqa Diiday, Taasna Eebaa u Yaboohay kuwa Xaqa ku Taagan inuu u Gargaaro markay Run Sheegaan oo Fuliyaan Sharciga Eebe kuna Dhaqmaan. Ash-Shucaraa' (116-122).

123. Waxay Beeniyeen Caad Rasuuldii.

﴿كَذَّبَتْ عَادَ الْمُرْسَلِينَ﴾

124. Markuu ku Yidhi Walaalkood Huud Miyeydaan Dhawrsanayn.

﴿إِذْ قَالَ لَهُمُ أَحُوهُمْ هُوَذَا آتَيْنَهُمْ﴾

125. Anigu waxaan idiin ahay Rasuul Aamin ah.

﴿إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ﴾

126. Ee ka Dhawrsada Eebe Ina Adeeca.

﴿فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا﴾

127. Idinkamana Warsanaayo Xaqa ujuuro, Ajrigaygana Eebaha Caalamkaan ka Sugi.

﴿وَمَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِنْ أَجَرْتُمْ إِلَىٰ آلِ عَادِ رَبِّ الْعَالَمِينَ﴾

128. Miyaad ka Dhisaysaan Meel Sare oo Dhan Calaamad (Daar) Idinkoo Ciyaari.

﴿أَتَيْتُونَنِي بِكُلِّ رِيعٍ آتَاةٍ تَعْبَثُونَ﴾

129. Ood Yeelanaysaan Masaanic (Dhismo) inaad Waartaan Darteed.

﴿وَتَتَخَذُونَ مِصْبَاحَ لَعَلَّكُمْ تَخْلُدُونَ﴾

130. Haddaad wax Qabataan Ciqabtaan una Ciqaabaysaan si Daran.

﴿وَإِذَا بَطِشْتُمْ بَطِشْتُمْ جَبَّارِينَ﴾

131. ee Eebe ka Dhawrsada Ina Adeeca.

﴿فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا﴾

132. Kana Dhawrsada Eebaha idin Siyey waxaad Ogtihiin.

﴿وَاتَّقُوا الَّذِي أَمَدَّكُمْ بِمَا تَعْلَمُونَ﴾

133. Wuxuu idin Siiyey Xoolo iyo Caruur.

أَمَدَّكُمْ بِأَعْدِيٍّ وَيَّوِيْنٍ ﴿١٣٣﴾

134. Iyo Beero iyo Ilo.

وَجَنَّتِ وَعُيُونٍ ﴿١٣٤﴾

135. Waxaana Idiinka Digi Cadaab Maalin Wayn.

إِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٣٥﴾

Ree Caad wax Badan Yuu Quraanku ka Warramay, waxaase Mudan in laysku Baraarujiiyo siday wax u Dhisan jireen Kibir, Isla wayni iyo Waarid Darteed, maxayse u Tartay, waxba, waxaa la Sheegay in Markuu Arkay Abuu dardaa waxay Muslimiintu ka Dhiseen Qoodhai inuu ka istaagay Masaajidka, kuna dhawaaqay Ree Dimishiqow markay ku soo kulmeenna u Eebe ammaanay oos Yidhi: Miyeedaan Xishoonayn, waxaad kulminaysaan waxaydaan Cunayn, waxaad Dhisaysaan waxaydaan Dagayn, waxaadna Doonaysaan waxaydaan Gaadhayn, waxaa Idinka horeeyey Caad oo Hanatay Cadan iyo Cummaan Dhexdeeda ee Yaa Dhaxalkoodii iga Siin Labo Dirham. Ash-Shucaraa' (123-135).

136. Waxay Dheheen waxaa Isu kaanna Mid ah Waanisayaa ama Maadan Waanininaa.

قَالُوا سَوَاءٌ عَلَيْنَا أَوَعَظْتَ أَمْ لَمْ تَكُن تَنْتَهِ الْأَوْعِظِينَ ﴿١٣٦﴾

137. Kanna ma aha waxaan Dabeecad-dii «Diintii» Dadkii hore ahayn.

إِن هَذَا إِلَّا الْخُلُقُ الْأَوَّلِينَ ﴿١٣٧﴾

138. Nalamana Cadaabayo.

وَمَا تَنْحَنُ بِمُعَذِّبِينَ ﴿١٣٨﴾

139. Wayna Beeniyeen, Markasaan Halaagnay. Taasina waxaa ku Sugaan Calaamad, mana aha Badankoodu kuwo Rumayn.

فَكَذَّبُوهُ فَأَهْلَكَنَّهُمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿١٣٩﴾

140. Eebahaana waa Adkaade Naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ﴿١٤٠﴾

141. Waxay Beenisay Thamuud Rasuul-ladii.

كَذَّبَتْ ثَمُودُ الْمُرْسَلِينَ ﴿١٤١﴾

142. Markuu ku Yidhi Walaalkood (Nabi) Saalax Miyaydaan Dhawrsanayn.

إِذْ قَالَ لَهُمْ أَخُوهُمْ صَالِحٌ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٤٢﴾

143. Waxaan idiin ahay Rasuul Amin ah.

إِنِّي لَكُرْهُرُ سُوْلٍ أَمِينٍ ﴿١٤٣﴾

144. ee ka Dhawrsada Eebe ina Adeeca.

فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا ﴿١٤٤﴾

145. Idinkamana Warsanaayo Xaqa ujuuro, Ajrigayga Eebaha Caalamkaan ka Sugi.

وَمَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِنْ أَتَيْتُمْ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿١٤٥﴾

Markay Qoomkii Nabi Huud ka Madax adaygeen Xaqii ooy isugu mid Noqotay waano iyo La'aanteed, Diideenna wax u Sheegii, Sheegteenna inaan la Cadaabayn Yaa Eebe Halaagay, Taasina waa Abaalka Xaqdiidaayaasha.

Sidoo kale waxaa Eebe u Diray Thamuud Nabi Saalax, wuxuuna la maray Waddaday la Mareen Nabiyadii kale, wuxuu Xaalku ku Dambeeyeyna Wuu Imaan, waxaadse Moodaa in Gaaladu Ceel kaliya ka Cabbeen, waa Ceelka Xumaanta. Ash-Shucaraa' (136-145).

146. Ma waxaa Laydinkaga Tagi Hal-kan idinkoo Aamina.

أَتَزْكُونَ فِي مَا هُنَاءَ آمِينَ ﴿١٤٦﴾

147. Oo ku Sugaan Basaatiin iyo Ilo (Socda).

فِي جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ ﴿١٤٧﴾

148. Iyo Beero iyo Timir Fiideedu Bisayl Tahay.

وَزُرُوعٍ وَنَخْلٍ طَلْمُهَا هَاضِمٌ ﴿١٤٨﴾

149. Ood ka Qoranaysaan Buuraha Guryo idinkoo Kibirsan.

وَتَنْجُونَ مِنَ الْجِبَالِ الَّتِي نُتِيقُهَا لِقَادِرِهَا ﴿١٤٩﴾

150. Ee Eebe ka Dhawrsada ina Adeeca.

فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا ﴿١٥٠﴾

151. Hana Adeecina «Maqlina» Amar-ka Xadgubayaasha.

وَلَا تُطِيعُوا أَمْرَ الْمُسْرِفِينَ ﴿١٥١﴾

152. ah kuwa Fasaadiya Dhulka oon Hagaajinayn.

الَّذِينَ يَفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ وَلَا يُصْلِحُونَ ﴿١٥٢﴾

153. Waxay Dheheen waxaad uun ka mid Tahay kuwa la Sixray.

قَالُوا إِنَّمَا آتَيْنَا مِنَ الْمُسْحَرِينَ ﴿١٥٣﴾

154. Mana Tihid waxaan Dad nala mid ah ahayn ee noo keen Aayad Haddaad run Sheegi.

مَا آتَى إِلَّا نَسْرٌ مِنَّا فَأَنْتَ بِآيَاتِنَا إِن كُنتَ مِنَ الصَّادِقِينَ ﴿١٥٤﴾

155. Wuxuu Yidhi Tani waa Hal, Maalinbay Cabbi idinkuna Maalinbaad Cabbaysaan la Yaqaan.

قَالَ هَذِهِ نَافَةٌ لَهَا شِرْبٌ وَلَكُمْ شِرْبٌ يَوْمَ مَعْلُومٍ ﴿١٥٥﴾

156. Ee ha ku Taabanina Xumaan, oos idin qabto Cadaab Maalin wayn.

وَلَا تَمْسُوهَا سَوْءٌ فَيَأْخُذَكُمْ عَذَابٌ يُؤلم عَظِيمٌ ﴿١٥٦﴾

157. Wayse Dileen waxayna ahaadeen kuwo Qoomameeya.

فَعَقَرُوهَا فَاصْبِرُوا نَدِيمِينَ ﴿١٥٧﴾

158. Waxaana Qabtay Cadaab Taasna waxaa ku Sugaan Calaamad, Badan-koodna ma aha kuwo Rumayn (Xaqa).

فَأَخَذَهُمُ الْعَذَابُ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿١٥٨﴾

159. Eebahaana waa Adkaade Naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ﴿١٥٩﴾

Cid Ladnaan iyo Kibir ku Waari ma jirto, Qoomkii Nabi Saalaxna markay Xaqii ka Madax adaygeen oo Beeniyeen Nabigii oy Dileen Hashii Calaaamadda u ahayd Yaa Eebe Halaagay oo Ciqaabay, Adduunyana waa Beer, Cagaaran oo Maruun Ingagi, waxaase Habboon in Si Fiican loogu Dhaqmo Xaqa. Ash-Shucaraa' (146-159).

160. Waxay Beeniyeen Qoomkii (Nabi) Luudh Rasuuladii.

كَذَّبَتْ قَوْمُ لُوطٍ الْمُرْسَلِينَ ﴿١٦٠﴾

161. Markuu ku Tidhi Walaalkood Luudh Miyeydaan Dhawrsanayn.

إِذْ قَالَ لَهُمُ أَحُوهُرُ لُوطُ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٦١﴾

162. Waxaan idiin ahay Rasuul Aaminee.

إِنِّي لَكُرْسُومٌ أَمِينٌ ﴿١٦٢﴾

163. ee ka Dhawrsada Eebe ina Adeeca.

فَأَنْشُرُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١٦٣﴾

164. Idinkama Warsanaayo Xaqa Ujuuro, Ajrigayga Eebaha Caalamkaan ka Sugi.

وَمَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عِلًّا رِبِّ الْعَالَمِينَ ﴿١٦٤﴾

165. Ma waxaad u Tagaysaan Ragga Caalamka.

أَتَأْتُونَ الذِّكْرَانَ مِنَ الْعَالَمِينَ ﴿١٦٥﴾

166. Ood ka Tagaysaan waxa Eebe idiin Abuuray oo Haweenkiina ah, waxaadse Tihii Kuwo Xadgudba.

وَيَذَرُونَ مَا خَلَقَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَنْ تَنْتَهَوْا قَوْمَ عَادٍ ﴿١٦٦﴾

167. Waxay Dheheen haddadan Joogin Luudhow Waxaad Noqon Kuwa la Bixiyo.

قَالُوا لَيْنَ لَوْلَا تَنْتَهَوْا لَكُنْتُمْ مِنَ الْخَارِجِينَ ﴿١٦٧﴾

168. Wuxuu Yidhi (Luudh) Anigu Camalkiinna waan la Cadhaysnahay.

قَالَ إِنِّي لَعَمْرُكَ مِنَ الْفَالِسِينَ ﴿١٦٨﴾

169. Eebow iga Kori iyo Ehelkaygaba waxay Falayaan.

رَبِّ يَحْيَىٰ وَأَهْلِي مَا يَتَمَلَّوْنَ ﴿١٦٩﴾

170. Waana korinay Isaga iyo Ehelkii-siiba Dhammaan.

فَنَجَّيْنَاهُ وَأَهْلَهُ أَجْمَعِينَ ﴿١٧٠﴾

171. Habar ku Hadhay Mooyec (haweenyadiisii).

إِلَّا عَجُوزًا فِي الْغَابِرِينَ ﴿١٧١﴾

172. Markaasaan Halaagnay Intii kale.

فَوَدَّعَزَّوَجَدْنَا الْآخِرِينَ ﴿١٧٢﴾

173. Waxaa ku soo Daynay (Roob Dhagax Naara) waxaana u Xun Roobka kuwa Loo digay.

وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِمْ مَطَرًا مَسَاءً مَطَرِ الْمُنذَرِينَ ﴿١٧٣﴾

174. Taasna waxaa ku Sugaan Calaaamad, Badankoodna ma aha kuwo Rumayn.

إِن فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُ مُؤْمِنِينَ ﴿١٧٤﴾

175. Eebahaana waa Adkaade Naxa-riista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ﴿٧٥﴾

Qoomkii Nabi Luudh waxay ku Caan ahaayeen wax Sheegiddiisa laga Xishoodo oo ah inay Ragga Aadi jireen Haweenka ka Sokow, waana Caado Xun oo Ciqaab Mudata, waxaana Loo Ciqaabay si Daran Cid kasta oo waxyaalahaas oo kale ku Kacdana waa Cid Dullaysan oo Wasakhawday, waxayna Dharbaaxo ku tahay kuwa Buka ee Dabaalan waxaas. Ash-Shucaraa' (160-175).

176. Waxay Beeniyeen Kayntii Ehelkeedii Rasuulladii.

كَذَّبَ أَصْحَابُ لَيْكَةِ الْمُرْسَلِينَ ﴿٧٦﴾

177. Markuu ku Yidhi Nabi Shucayb Miyeydaan Dhawrsanayn.

إِذْ قَالَ لَهُمْ شُعَيْبٌ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿٧٧﴾

178. Waxaan idiin ahay Rasuul Aaminee.

إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿٧٨﴾

179. ee ka Dhawrsada Eebe ina Adeeca.

فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا ﴿٧٩﴾

180. Idinkama Warsanaayo Xaqa Ujuuro, Ajrigayga Eebaha Caalamkaan ka Sugi.

وَمَا أَشْكُرُ عَلَيْهِ مِنْ آبْرَئِيلَ إِذْ أَخْرَجْتَهُ مِنَ الْبَطْنِ وَكَرَّمُوا الْغَالِيِينَ ﴿٨٠﴾

181. Oofiya (Dhammaystira) Beegidda hana ka mid Noqonina kuwa Nusqaamiya.

*أَوْفُوا الْكَيْلَ وَلَا تَكُونُوا مِنَ الْمُخْسِرِينَ ﴿٨١﴾

182. Una Miisama Caddaalad Toosan.

وَزِنُوا بِالْقِسْطِ أَسْمَانَ الْمُسْقِيبِ ﴿٨٢﴾

183. Hana ka Nusqaaminina Dadka waxooda hana Xumaynina Dhulka Idinkoo Fasaadin.

وَلَا تَبْخَسُوا النَّاسَ أَشْيَاءَهُمْ وَلَا تَعْمُوا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ ﴿٨٣﴾

184. Kana Dhawrsada Eebaha idin Abuuray iyo Khalqigii Horreeyey.

وَاتَّقُوا الَّذِي خَلَقَكُمْ وَالْجِبَالَ الْأُولَىٰ ﴿٨٤﴾

Qoomkii Nabi Shucaybo oo Dhulka Madyan Daganaa waxay Beeniyeen Xaqii, waxayna ku Caan Baxeen inay Nusqaamiyaan Miisaanka iyo Suuskaba, Dadkana Saas uga Nusqaamiyaan Xaqooda, wuxuuna Nabi Shucayb isku Dayey inuu ka Reebo Arrintaas, Dhulkana Ayan Fasaadin, wayse ka Madax adaygeen Xaalkaas sida ka Muuqata Aayadaha soo Socda. Waxaana Dhab ah in Cunnada oo Dadka lagu Khayaamo Lagana Nusqaamiyo ay Tahay Arrin Xun oo Ciqaab iyo Halaag Mudan, Yaase Garansiin kuwa ku Dhaqma Xaalkaas Eebe Mooyee, Ciddii Caqliheise waa inay ka Joogtaa ka Hor Maalinta Dadku u Istaagi Ilaaha Caalamka. Ash-Shucaraa' (176-184).

185. Waxay Dheheen waxaad uun Tahay kuwa la Sixray.

قَالُوا إِنَّمَا أَنْتَ مِنَ الْمُسَحَّرِينَ ﴿٨٥﴾

186. Mana Tihid waxaan Dad nala mid

وَمَا أَنْتَ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُنَا وَإِن نَّظُنُّكَ لَمِنَ

ah ahayn, waxaana kuu Malay naynaa kuwa Beenaalayaasha ah.

الكَذِبِينَ ﴿١٨٦﴾

187. ee Nagu soo Rid Goosimo Samada ka mid ah haddaad Run sheegi.

فَأَسْقِطْ عَلَيْنَا كِسْفًا مِّنَ السَّمَاءِ إِن كُنتَ مِنَ الصَّادِقِينَ ﴿١٨٧﴾

188. Wuxuu Yidhi Eebahay baa og waxaad Falaysaan.

قَالَ رَبِّيَ أَعْلَمُ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٨٨﴾

189. Wayna Beeniyeen waxaana Qabtay Cadaab Maalintii Hadhka, waana Cadaab Maalin Wayn.

فَكَذَّبُوهُ فَأَخَذَهُمُ عَذَابٌ يَّوْمَ الظُّلَّةِ إِنَّهُ كَانَ عَذَابٌ يَّوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٨٩﴾

190. Arrintaasna waxaa ku Sugaan Calaamad mana aha Badankoodu mid Rumayn.

إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٩٠﴾

191. Eebahaana waa Adkaade Naxariista.

وَلَا رَيْكَ لَهُمُ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ﴿١٩١﴾

Waxay kuwanna ku Jawaabeen Jawaabtii kuwii ka Horeeyey oo kale, waxayna ku Sheegeen Sixir, wayna Beeniyeen, waxay warsadeen in Cirka Goosino Cadaaba looga soo Rido, Eebase waa ogayahay waxay Fali waxaana qabtay Cadaab Hadheeyey oo Wayn.

Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Wuxuu Ilaahay ku soo Daayey Onkod iyo Kulayl Daran oo ku Dhajiyey Neefta, markaasay ka Baxeen Guryaha iyago u Carari Dibadda, Markaasaa Eebe Daruur ka Hadhaysa Qorraxda ku soo Daayey markay ku soo Kulmeenna uu Eebe ku soo Daayey Naar Gubtay. Ciqaabta Eebana kama Fogo Daalimiinta Xaq Diidayaasha ah. Ash-Shucaraa' (185-191).

192. Quraankuna waa soo Dejin Ebaha Caalamka.

وَأَنَّهُ لَآتِيَنِي رُبِّيَ الْمَلَكِينَ ﴿١٩٢﴾

193. Waxaa kula soo degan Ruux Aamin ah (Jibriil).

نَزَلَ بِهِ الرُّوحُ الْأَمِينُ ﴿١٩٣﴾

194. Qalbigaaga inaad ahaato kuwa ku Diga.

عَلَى قَلْبِكَ لَتَكُونَ مِنَ الْمُنذِرِينَ ﴿١٩٤﴾

195. Af Carabi aho Cad.

بِلِسَانٍ عَرَبِيٍّ مُّبِينٍ ﴿١٩٥﴾

196. Quraankuna wuxuu ku Sugnaa Kutubtii hore.

وَأَنَّهُ لَبئذٍ لَرُبُّهُمُ الْآوَّلِينَ ﴿١٩٦﴾

197. Miyeyna Calaamad ugu Fillayn inuu Yaqaanno Culimadii Banii Israa'iil.

أَوَلَمْ يَكُن لَّهُمْ آيَةٌ أَن بَعَثْنَا مِنِّي بِرُوحِي إِسْرَائِيلَ ﴿١٩٧﴾

198. Haddaan ku soo Dejino Quraankan Cajamiga Qaarkiis.

وَلَوْ نَزَّلْنَاهُ عَلَىٰ بَعْضِ الْأَعْجَمِينَ ﴿١٩٨﴾

199. oo uu ku Akhriyo Korkooda mayna Rumeeyeen.

فَقَرَأَهُ عَلَيْهِمْ مَا كَانُوا بِهٖ مُّؤْمِنِينَ ﴿١٩٩﴾

200. Saasaan u Galinay Diidada Qu-luubta Dambiilayaasha. كَذَلِكَ سَلَكَهُ فِي قُلُوبِ الْمُجْرِمِينَ ﴿٢٠﴾
201. Mana Rumaynayaan Xaqa Intay ka Arkaan Cadaab Daran. لَا يُؤْمِنُونَ بِهِ حَتَّىٰ يَرُوا الْعَذَابَ الْأَلِيمَ ﴿٢١﴾
202. Oos ugu Yimaaddo Cadaabku Kado Iyagoon Ogayn. فَيَأْتِيهِمْ بَغْتَةً وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٢٢﴾
203. Oy Dhahaan ma nala Sugi. فَيَقُولُوا هَلْ نَحْنُ مُنظَرُونَ ﴿٢٣﴾
204. Ma Cadaabkanagay Dadajisan. أَفَعَدَّآبَاتِنَا لَمَن جَاءَلُونَ ﴿٢٤﴾
- Aayadahan Eebe wuxuu ku Tilmaamay Quraanka inuu yahay soo Dejin Eebe, oo Jibriil u soo Dhiibay, kuna Soo Dejiyey Qalbiga Nabiga, Luuqadda Carabiga ahna ku soo Dejiyey, Kutubihii Horana lagu Caddeeyey, Culimadii Banii-Israa'illa ay Ogaayeen. Dambiilayaashuse ay Beeniyeen, ayna saas ahaadaan intay ka arkaan Caddab Daran, uguna Yimaadda Kado, iyagoon Ogayn Oy Markaas Calaacalaan, Yidhaahdaana Maa nala Sugo, waxayse Dedejisanyeen Cadaabka. Sufyaan wuxuu Yidhi: Waxyi Dhammaantii wuxuu ku Dagayey Carabi ee waxaa Tarjumayey Nabiyada. Ash-Shucaraa' (192-204).
205. Ka Warran Haddaan u Raaxayno Sanooyin. أَفَرَأَيْتَ إِن مَّتَّعْنَاهُمْ سِنِينَ ﴿٢٥﴾
206. Markaas uu u Yimaaddo wixii loogu Goodinaayey. ثُمَّ جَاءَهُمْ مَا كَانُوا يُوعَدُونَ ﴿٢٦﴾
207. Muxuu uga Tari Xaggooda wixii loogu Raaxeyey. مَا أَخْفَىٰ عَنْهُمْ مَا كَانُوا يَمْتَعُونَ ﴿٢٧﴾
208. Magaalo aan Halaagno oon loo Diginna ma Jirto. وَمَا أَهْلَكَ مَا مِنْ قَوْمٍ إِلَّا لَهَا مُنْذُرُونَ ﴿٢٨﴾
209. Waano Darteed, mana nihin Daa-limiin. ذِكْرَىٰ وَمَا كُنَّا ظَالِمِينَ ﴿٢٩﴾
210. Kumana soo Degto Quraanka Shayaadiintu. وَمَا تَزَلَتْ بِهِ السَّيْطَانُ ﴿٣٠﴾
211. Kumana Habboona mana Karaan. وَمَا يَنْبَغِي لَهُمْ وَمَا يَسْتَبِغُونَ ﴿٣١﴾
212. Shayaadiintu Maqalka waa ka Fogyihiin. إِنَّهُمْ عَنِ السَّمْعِ لَمَعْرُولُونَ ﴿٣٢﴾
213. Ee ha Caabudin (Baryin) Eebe Miciisa Ilaah kale ood Noqoto kuwa la Cadaabo. فَلَا تَدْعُ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ فَتَكُونَ مِنَ الْمُعَذَّبِينَ ﴿٣٣﴾
214. Una Dig Qaraabadaada Kuu sii Dhaw. وَأَنْذِرْ عَشِيرَتَكَ الْأَقْرَبِينَ ﴿٣٤﴾

215. Una Raarici Garabkaaga (U Naxariiso) Ciddii ku Raacda oo Mu'miiniinta ah. وَأَخْفِضْ جَنَاحَكَ لِمَنِ اتَّبَعَكَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١١٥﴾
216. Hadday ku Caasiyaanna waxaad Dhahdaa anigu Bari baan ka ahay waxaad Falaysaan. فَإِنْ عَصَوْكَ فَقُلْ إِنِّي بَرِيءٌ مِّمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١١٦﴾

Raaxo Adduunna wax ma tarto markay Cigaabtu Timaaddo, waxaa Sugnaaday in la keeni Qiyaamada Gaalka oo Naarta la Tiimbin Markaas la Dhihi Khayr Waligaa ma Aragtay, Nicmo Waligaa ma Aragtay, oo u Dhihi Wallahi Maya, La Keenina kii ugu dhibaato Badnaa Adduunka oo la Taabsiin Janada Markaas la Dhihi ma Aragtay Xumaan Waligaa oos Dhihi Waligay Maya, Nabiga iyo Quraanka Shaydaan uma soo Dhawaado, lamana so Degin, waase ka Fogyihiin Cibaadana Eebe Kaliyaa Muta, Eebana wuxuu Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa yeelee) inuu marka Hore U digo Qaraabada Illeen haddii kale See Dadka kale Wax u Rumayn, wuuna Yeelay Nabigu Sidaas, Tan kale wuxuu Eebe Faray inuu u Naxariisto Mu'miniinta Islaamkuna waa Diin Isu naxariisasho. Ash-Shucaraa' (205-216).

217. Talo Saaro Eebaha Adkaada ee Naxariista. وَتَوَكَّلْ عَلَى الْعَزِيزِ الرَّحِيمِ ﴿١١٧﴾
218. Ee ku Arka Markaad Kici. الَّذِي يَرَاكَ حِينَ تَقُومُ ﴿١١٨﴾
219. Iyo Lagagadoonkaaga kuwa Tukan. وَتَقَلِّبُكَ فِي السَّجْدِ ﴿١١٩﴾
220. Eebana waa Maqle Og. إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿١٢٠﴾
221. Ma idiinka Warramaa Ruuxay ku soo Degi Shayaadiintu. هَلْ أُنَبِّئُكُمْ عَلَىٰ مَن تَنَزَّلُ السَّيْطِينُ ﴿١٢١﴾
222. Waxay ku soo Degi Beenaale Dambi Badan oo Dhan. تَنَزَّلُ عَلَىٰ كُلِّ أَفَّاكٍ أَثِيمٍ ﴿١٢٢﴾
223. Waxayna Xadi Maqalka Badan-koodna waa Beenaalayaal. يُلْقُونَ السَّمْعَ وَأَكْتُرُّهُمْ كَذِبُونَ ﴿١٢٣﴾
224. Gabayaana waxaa Raaca kuwa Baadida ah. وَالشُّعْرَاءُ يَتَّبِعُهُمُ الْغَاوُونَ ﴿١٢٤﴾
225. Miyaadan Arkin in Iyagu Tog kasta (Xumaan) ay ku Dhex Wareersanyihiin. أَلَمْ تَرَ أَنَّهُمْ فِي كُلِّ وَادٍ يَهِيمُونَ ﴿١٢٥﴾
226. Oyna Sheegi waxayna Falayn. وَأَنَّهُمْ يَقُولُونَ مَا لَا يَفْعَلُونَ ﴿١٢٦﴾
227. Kuwa Xaqa Rumeeyey Mooyee oo Camal Fiican Fala oo Xusa Eebe wax Badan, oo Gargaarta Dulmi ka Dib, كَثِيرًا وَأَتَّصَرُّوْا مِنْ بَعْدِ مَا ظَلَمْتُمْ أَوْ سَمِعْتُمْ آلَاءَ رَبِّكُمْ فَانْتَمَرْتُمْ سَاءَ مَا يَحْكُمُونَ الْقَوْمَ ﴿١٢٧﴾

waxayna Ogaan doonaan kuwii Dulmi
Falay soo Noqoshaday soo Noqdaan
(Qiyaamada).

ظَلَمُوا أَيُّ مُنْقَلَبٍ يَنْقَلِبُونَ ﴿٣٧﴾

Waa in La talo Saarto Eebaha Adkaada ee naxariista, ee ku Arka Markaad Istaagi iyo Gagadoonkaaga kuwa Tukan ee Maqli ee Og. Shaydaanna wuxuu ku soo Degaa Been badane, Dambi badan, Heesta iyo Gabayga oo Waqtiga kaa Dhumiyana waa Caayanhiihin, waxaana Raaca Heesaaga kuwa iska Baadida ah, waxaana ka mid ah Caadada Heesaaga iyo Gabayaaga inay ku Wareeraan oo Dhexgalaan wax kasta, ooy Sheegaanna waxayna, Falin, marka Laga Reebo kuwa xaqa Rumeeyey ee Wanaagga Fala oo Gargaarta intii la Dulmiyey, Daalimna wuxuu Ogaan markuu Eebe u Noqdo, Gabayguna markuu Bato oo wax walba la Sheego, oon runta laga sheegin, oo lagu Caayo Cidaan Mudan, laguna Amaano cidaan mudan waa Aafo iyo Balaayo Ruuxa ka Buuxda Islaamkuna ma Ogola, Siduu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee) u yidhi: in Laabta Midkiin Malaxu Dhaamiso yaa ka Khayroon inuu Gabay ka Buuxsamo (Imaam Axmed) Hadduuse yahay mid xaqa loogu Hiiliin, wanaaggana Fari, Xumaantana Reebi kaasi ma Cayna mana Xuma.
Ash-Shucaraa' (217-227).



Suurat An-Naml

سُورَةُ النَّامِلِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Xarafka hore Isagoo kale waan soo Maray) Inuu ku Tusin Mucjisada Quraanka, Taasi Waa Aayaadka Quraanka iyo Kitaabka Cad.

طَسَّ تِلْكَ آيَاتُ الْقُرْآنِ وَكِتَابٍ مُبِينٍ ﴿١﴾

2. Waana Hanuunka iyo Bishaarada Mu'miniinta.

هُدًى وَبُشْرَى لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٢﴾

3. Ee ah kuwa Ooga Salaadda oo Guta Zakada oo Aakhiro Yaqiin.

الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَهُمْ بِالْآخِرَةِ هُمْ يُوقِنُونَ ﴿٣﴾

4. Kuwaanse Rumayn Aakhiro waxaan u Qurxinay Camalkooda waana ku Indho la'Yihiin (Wareersanyihiin).

إِنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ رَبَّتْنَا لَهُمْ أَعْمَالُهُمْ فَنِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿٤﴾

5. Kuwaasi waa Kuwuu u Sugnaaday Cadaab Xun Aakharana Iyaga unbaa Khasaaray.

أُولَئِكَ الَّذِينَ لَهُمْ سُوءُ الْعَذَابِ وَهُمْ فِي الْآخِرَةِ هُمْ الْآخْسَرُونَ ﴿٥﴾

6. Adiguna Nabiyow waxaad kala Kulmi Quraanka Ilaaha Falka San ee Og Agtiisa.

وَأَنَّكَ لَتَلَقَى الْقُرْآنَ مِنْ لَدُنْ حَكِيمٍ عَلِيمٍ ﴿٦﴾

Suuraddu waxay ka warrami in Quraanka Kariimka ah Hanuun iyo Bishaaro u Yahay Mu'miniinta Xaqa Rumaysan ee Salaadda si Fiican u Guta, Zakadana Bixiya, Aakharana Yaqiinsan, kuwaanse Rumaynin Aakharo waxaa loo Qurxiyey Camalkooda Xun Oyna ku Dhex Wareersanyihiin, waana kuwa Cadaab Xun u Sugnaaday oo Khasaaray Aakharo Illeen weybeeniyee. Dhabtuna waa in Quraanku ka soo Degay Ilaaha Xakiimka ah ee wax walba Og Xaggiisa Warkiisuna waa Run Cad. Xukunkiisuna waa Caddaalad Dhammaystiran. Waxaaase loo Baahanyahay Rumayn, ku Dhaqan, ugu Yeedhid iyo Dhawrid. An-Naml (1-6).

7. Xusuuso Markuu ku Yidhi Nabi Muuse Ehelkiisa Anugu waxaan Arkaa iftiin waxaan Idiinka Keeni Xaggiisa War Ama Waxaan idiinka Keeni Dhuxul Daba inaad Kulaashaan.

إِذْ قَالَ مُوسَى لَأَهْلِيهِ إِنِّي آنستُ نَارًا سَتَيْتُكُمْ بِهَا بِخَبْرٍ
أَوْ أَيْتِكُمْ بِشَيْءٍ قَبْسٍ لَعَلَّكُمْ تَهْتَلُونَ ﴿٧﴾

8. Markuu Yimid waxaa Loogu Dha-

فَلَمَّا جَاءَهَا نُورِدَى أَنْ نُورِكَ مَنْ فِي النَّارِ وَمَنْ حَوْلَهَا

waaqay Waa la Barakeeyey Cidda
Dabka la Jooqta iyo kuwa Gaararkiisa
ah, waxaana Nasahan Ilaaha Caalam-
ka.

وَسَبِّحْ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٨﴾

9. Muusow Anugu waxaan ahay Ilaaha
Adkaada ee Falka San.

يَتَّبِعُونَ آيَاتِنَا اللَّهُ الرَّبُّ الْكَبِيرُ ﴿٩﴾

10. Ee Tuur Ushaada, Markuu Arkay
Iyadoo Gilgilan Sida Maska wuu Jeed-
saday Isagoo Carari, Mana so Noqon,
Muusow ha Cabsanin, kuma Cabsaa-
daan Agtayda Rasuulladuye.

وَأَلَىٰ عَصَاكَ فُلْمَارَةٌ آهَاتُهُمْ كَأَنَّهَا جَانٌّ وَلَىٰ مُدِيرِ
وَلَوْ يَعْلَمُونَ يَتَّبِعُونَ لَآتِي لَآيَحْتَفَىٰ لَدَىٰ
الرَّسُولِ ﴿١٠﴾

11. Ciddiise Dulmi Fasha markaas
Wanaag ku Baddasha Xumaan ka Dib
Anugu waxaan ahay Dambi Dhaafe
Naxariista.

إِلَّا مَنْ ظَلَمَ ثُمَّ بَدَّلْ حُسْنًا بَعْدَ سُوءٍ فَإِنِّي غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١١﴾

Qisiada Nabi Muuse iyo sida Ilaaheen ula Hadlay Meelo Badan yaa lagu sheegay, waxayna ku Tusin in Ilaahay Cidduu Doono oo Rasuuladiisii ka mid ahaa la Hadli Jiray, Tan kale waxay ku tusin in Nabiyaada Ceeb ku ahayn Cabsida Caadiga ah, wax Sharaftooda wax u Dhimana ayna ahayn. Tan kale waxay ku Tusin Awoodda Eebe iyo inuu wuxuu Doono Fali Karo. Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeeclee) Wuxuu Yidhi: Ilaahay Ma Seexdo kumana Habboona (Waa ka Dheeryahay) inuu Seexdo, Wuxuu Hoos u Dhigaa ama Koryeela (Qaybta) waxaa u Kor Noqda Xaggissa Camalka Habeenka Maalinta ka hor, iyo kan Maalinta Habeenka ka Hor. Waxaa wariyey (Ibnu Abii Xaatim). An-Naml (7-11).

12. Gali Gacantaada Jeebkaaga waxay
soo Bixi Iyadoo Cad Xumaan La'aan
(Waxayna ka mid yihiin) Sagaal Calaa-
mo oo Fircoon iyo Qoomkiisa loo
Muujiyey, waxayna ahaayeen Qoom
Faasiqiina.

وَأَدْخِلْ يَدَكَ فِي جَيْبِكَ تَخْرُجَ بِيضًا مِّنْ غَيْرِ سُوءٍ فِي ثَمَعٍ
أَعْيَبَتْ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَفِرْعَوْنٌ قَوْمُهُ إِنَّهُمْ كَانُوا قَوْمًا فَاسِقِينَ ﴿١٢﴾

13. Markay u Timid Calamaddannadii
Iyadoo Cad waxay Dheheen Kani waa
Sixir Cad.

فَلَمَّا جَاءَهُ نُجُومٌ إِنَّا نَأْمُرُ بِهَا قَالُوا هَذَا
سِحْرٌ مَُّرْيُوبٍ ﴿١٣﴾

14. Wayna Diideen Iyagooy Yaqiinsa-
tay Naftoodu Dulmi iyo Isla Sarreeyn
Darteed, ee Day Siday ahaatay Cidhib-
tii Mufsiidinta (Xumo Wadayaasha).

وَرَحَّوْهُ لِيَوْمِهَا وَاسْتَقْبَلَتْهَا أَنْفُسُهُمْ ظُلْمًا وَأَعْمَىٰ
فَانظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الْمُفْسِدِينَ ﴿١٤﴾

Mucjisooiyinka iyo Calamadaha la Siyey Nabi Muuse waxay ahaayeen Sagaal Oy ka Mid ahaayeen Usha iyo Gacantu Siday Suurad kale Sheegtay. si Fircoon iyo Qoomkiisa Falka Xumaa loogu wax Tuso, wayse Beeniyeen Xaqii Iyagoo Hoosta ka Og Runta, si ay Madaxnimada iyo Isla Waynida ugu

Mitidaan, maxaase ka Dambeeyey oon Halaag iyo Khasaare ahayn, wax badanna waxaa la soo Sheegay in Dad Badan ay Diideen Xaqa iyagoo Garan Ilaalin iyo Dhawrid Maslaxo Gaara, Taasoo ah Madaxtinimo, Xoolo, iyo Isla Wayni Micno Darro. Ciddii Caqli lehna waa Xaal ay Waajibtahay inuu ku Wanno Qaato. An-Naml (12-14).

15. Waxaan siinay Daawuud iyo Sulaymaan Cilmi, waxayna Dheheen Mahad Ilaahbaa iska leh ee ah kan Naga Fadilay wax badan oo Addoomadiisa Mu'miniinta ah.

وَقَدْ آتَيْنَا دَاوُودَ وَسُلَيْمَانَ عِلْمًا وَقَالَ الْخَمْدُ لِلَّهِ
الَّذِي فَضَّلَنَا عَلَى كَثِيرٍ مِّنْ عِبَادِهِ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٥﴾

16. Wuxuuna Dhaxlay Sulaymaan Daawuud, wuxuuna yidhi Dadow waxaa nala Baray Codka Shimbiraha, waxaana nala siiyey wax kasta (oo Xukun ah) kaasina waa Fadliga Cad.

وَوَرَّثَ سُلَيْمَانَ دَاوُودَ وَقَالَ يَا أَبَتِ إِنَّكَ إِنَّمَا تُعَلِّمَانِي
مَنْطِقَ الطَّيْرِ وَأُوتِينَا مِنْ كُلِّ شَيْءٍ إِنَّ هَذَا لَهُمُ الْفَضْلُ
الْمُتِينِ ﴿١٦﴾

17. Waxaa Loo kulmiyey Sulaymaan Junuudiisii oo Jinni, Insi iyo Shimbiraha leh, iyadoo la celcelin.

وَحُضِرَ لِسُلَيْمَانَ جُنُودُهُ مِنَ الْجِنِّ وَالإِنْسِ
وَالطَّيْرِ فَهُمْ يُوزَعُونَ ﴿١٧﴾

18. Markay Yimaaddeen Togii Qudhaanjadana oy tidhi Qudhaanjo Qudhaanjooy Gala Guryihiinna Yeyna idin Jajabin Sulaymaan iyo ciidankiisu Iyagoon idin Ogayn.

حَتَّى إِذَا أَتَوْا عَلَى وَادِ النَّمْلِ قَالَتْ نَمْلَةٌ يَا أَيُّهَا
النَّمْلُ ادْخُلُوا مَسْكِنِي لَا يَحْطِمَنَّكُمْ سُلَيْمَانَ
وَجُنُودُهُ، وَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨﴾

19. Markaasuu Muusooday Isagoo ku Qosli Hadalkeeda wuxuuna yidhi Eebow I waafaji inaan ku Mahdiyo Nicmadaad ugu Nicmaysay Ani iyo Waalidkay iyo Inaan Faloo Wanaag Aad ka Raali tahay, ina Gali Naxariistaada Addoomadaada Suuban Dhexdooda.

فَتَبَسَّ ضَاحِكًا مِّن قَوْلِهَا وَقَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِي أَنْ
أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ الَّتِي أَنْعَمْتَ عَلَيَّ وَعَلَىٰ وَالِدِي وَأَنْ
أَعْمَلَ صَالِحًا تَرْضَاهُ وَأَدْخِلْنِي بِرَحْمَتِكَ فِي
عِبَادِكَ الصَّالِحِينَ ﴿١٩﴾

Wuxuu Eebbe Sheegi wuxuu ugu Nicmeeyey Nabi Daawuud iyo Wiilkiisii Nabi Sulaymaan oo Nicmooyin ah Adduun iyo Aakhiroba, iyo in Nabi Sulaymaan loo Sakhiray Jinni, Insi iyo Shimbirahaba, Barayna Hadalka Shimbiraha intuu ka Kaso Afkooda, Sidoo kale Codka Qudhaanjadii Uga digtay Saaxiibadeed Jajabinta Nabi Sulaymaan iyo Colkiisoon Ogayn.

uuna Qoslay kuna Mahdiyey Eebbe, Warsadayna Wanaag isaga iyo Waalidiintiis, waanakaas wanaaggu in marka Eebe khayr ku siiyo lagu Mahadiyo, wanaagna la falo, Xumaanta iyo Kibirkana layska Jiro oo laga Fogaado. An-Naml (15-19).

20. Wuxuu Fiirfiiriyey Shimbirihii (Sulaymaan) Wuxuuna Yidhi Maxaan la Arki La'ahay Hud-Hudkii Mise kuwa Maqan buu ka Midyahay.

وَتَفَقَّدَ الطَّيْرَ فَقَالَ مَا لِيَ لَا أَرَى الْهُدْهُدَ
أَمْ كَانِ مِنَ الْغَائِبِينَ ﴿٢٠﴾

21. Waxaan Cadaabi Cadaab Daran ama waan Gawrici ama wuxuu iikeeni Xujo Cad.

لَأَعَذِّبَنَّهٗ عَذَابًا سَدِيدًا أُولَٰئِكَ جَزَاءُ ۖ أُولَٰئِكَ يَنْتَهِبُونَ
بِسُلْطٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٢١﴾

22. Markaasuu Muddo Yar Maqnaa Markaasu Yidhi (Markuu Yimid) waxaan Ogaaday waxaadan Ogaanin, waxaana kaaga keenay Ree Saba War Yaqiina.

فَمَكَرَكَ عَدُوٌّ يَبِيدٌ فَقَالَ أَحَطَّتْ بِمَا لَمْ يُحِطْ بِهٖ
وَجِئْتِكَ مِنْ سَبِيلٍ يَنْتَهِبِينَ ﴿٢٢﴾

23. Waxaan Helay haweeney Xukumay-sa lana Siiyey wax kasta (oo Xukun ah) waxayna Leedahay Carshi Wayn.

إِنِّي وَجَدْتُ أَمْرًا تَمَلِكُكُمْ وَأُوتِيَتْ مِنْ كُلِّ
سَبِيلٍ وَلَهَا عَرْشٌ عَظِيمٌ ﴿٢٣﴾

24. Waxaan Helay Iyada iyo Qoomkeedii oo u Sujuudi Qorraxda Eebe ka Sokow wuxuuna U qurxiyey Shaydaan Camalkooda wuxuuna ka Leexiyey Jidka Mana Hanuunsana.

وَجَدْتُهُمْ وَقَوْمَهُمُ الْبَٰسِجُودَ لِلشَّمْسِ مِنْ دُونِ ٱللَّهِ
وَرَبِّنَّ ٱلْهَمُّ ٱلشَّيْطٰنُ ٱعْتَمَلَهُمْ فَصَدَّهُمْ عَنِ ٱلسَّبِيلِ
فَهُمْ لَا يَهْتَدُونَ ﴿٢٤﴾

25. May u Sujuudaan Ilaaha soo Bixiya waxa ku Qarsoon Samooyinka iyo Dhulka oo Og waxaad Qarinaysaan iyo waxaad Muujinaysaan.

ٱلَّذِينَ سَجَدُوا لِلَّهِ ٱلَّذِى يُخْرِجُ ٱلْخَبْءَ فِي ٱلسَّمٰوٰتِ
وَٱلْأَرْضِ وَيَعْلَمُ مٰتُخْفُونَ وَمَا تُعْلِنُونَ ﴿٢٥﴾

26. Ilaahay Isaga Mooye Ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, waana Eebaha Carshiga Wayn.

ٱللَّهُ ۖ لَآ إِلٰهَ ٱلَّا هُوَ رَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٢٦﴾

Awoodda Eebaa iska leh, ha siiyo Nabi Sulaymaan Xukun Laakiin waxaa ka Qarsoomi kara wax Xayawaan Yari Ogaan karo sida Hud-Hudka'kaasoo uga warramay Ree Saba iyo Xukunkooda iyo waxay Caabudaan, Taasina La Yaab malaha mar Hadday wax walba ku Xidhanyihiin Awoodda. Eebaha wax walba Koobay, ee Isaga uun Ilaah ah, ee Carshiga wayn Leh, Shaydaanbaase Dad Dhumiyey oo u Harag Lulay oo Xumaanta u Qurxiyey, waana Colka Dadka oon Marna ka Nasanayn Dhumintooda. Tan kale waxay ku Tusin Wanaagga Makhluuqa Qaarkiis sida Hud-Hudkaas Eebe iyo Cibaadadiisa u Yeedhay, Saas Darteed Yuu Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa he yeelee) u Reebay Dilidda Qudhaanjada. Shimbiraha, Hud-Hudka iyo Suradka..

Waxaa Wariyey (Iimaam Axmed) An-Naml (20-26).

27. Wuxuuna Yidhi Waannu Eegi inaad Run Sheegi iyo inaad ka mid Tahay Beenaalayaasha.

* قَالَ سَتَنْظُرُونَ أَصَدَقْتُمْ ۖ بَل لَّعَلَّكُمْ
ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٢٧﴾

28. La Tag Warqaddaydan kuna Tuur Xaggooda kana Durug Xaggooda, markaas Fiiri waxay soo Celiyaan.

أَذْهَبَ بِكُمۡ بِكُمۡ هٰذَا ۖ ٱلْقَبِيلَةُ ٱلْهَيْمَةُ ثُمَّ تَوَلَّىٰ عَنْهُمْ فَٱنظُرُوا
مَآذٰلِكُمْ جَمِيعًا ﴿٢٨﴾

29. Waxayna Tidhi Madaxey waxaa

قَالَتْ يٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَأُوٓءِلَآئِى ٱلْأَعْيُنِ ۖ إِن كِتَابِ ٱلْكَرِيمِ ﴿٢٩﴾

La ii soo tuuray Warqad Sharaf leh.

30. (Kuna Qoran) Waxay ka Timid Sulaymaan waxayna ku Billabatay Magaca Eebaha Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

إِنَّهُمْ مِنْ سُلَيْمَانَ وَإِنَّهُ بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ ﴿٣٠﴾

31. Ee Hayska kay waynaynina iina Imaadda Idinkoo Muslimiina.

أَلَا تَعْلَمُونَ أَنَّ الْمَلَائِكَةَ تُتَوَكَّلُونَ عَلَى الْمُسْلِمِينَ ﴿٣١﴾

32. Waxayna Tidhi Madaxeey ii Ishaara Amarkayga ma ihi Mid Goysa Amar Intaad ka Joogtaan.

قَالَتْ يَا أَيُّهَا الْمَلَأُوْءُ أَفَتُوْنِي فِيْ أَمْرِيْ مَا كُنْتُ قَاطِعَةً أَمْرًا حَتَّى تَشْهَدُوْنَ ﴿٣٢﴾

33. Waxayna Dhaheen Annagu waxaan Nahay kuwo Xoog badan oo Geesinimo Badan, amarkase adaa leh ee Fiiri Waxaad Fari.

قَالُوا نَحْنُ أَوْلُو الْقُوَّةِ وَأَوْلُو أَبْسَاسٍ شَدِيدٍ وَالْأَمْرُ إِلَيْكِ فَانظُرِي مَاذَا تَأْمُرِينَ ﴿٣٣﴾

34. Waxay Tidhi Xaakimyadu Hadday Magaalo ku Galaan (Xoog) way Fa-saadiyaan waxayna ka yeelaan Ehelkeeda Sharafta leh kuwo Dullaysan Saasayna Falaan.

قَالَتْ إِنَّ الْمُلُوكَ إِذَا دَخَلُوا قَرْيَةً أَفْسَدُوهَا وَجَعَلُوا أَعْرَبةَ أَهْلِهَا آذِلَّةً وَكَذَلِكَ يَفْعَلُونَ ﴿٣٤﴾

35. Waxaanse u Diri Hadyad waxaana Eegi waxay La soo Noqdaan kuwa la Diray.

وَإِنِّي مُرْسِلَةٌ إِلَيْهِمْ بِهَدِيَّةٍ فَنَاظِرَةٌ بِمَ عَرَجِ الْمُرْسَلُونَ ﴿٣٥﴾

Markay u Tagtay Warqadduu waday Hud-Hud oo Faraysay Islaanimo, yey la Tashatay Haweenaydii Madaxdeedii, markayse Ismuujiyeen inay Xoog Leeyihiin yey iyadu u Soo jeedisay Dagaal la'aan inay Hadyad u Dirto Eegtana Jawaabta waxayna ahayd Haweenay Caqli Badan oo Waayo Arag ah. Qataade Wuxuu yidhi: Yaa ka Caqli Badan Islaanimadeedii iyo Gaalimadeediiba. Maxayse tari Isla wayni iyo Kibir iyo Dagaal jacayl, waxba, waxaase Fiican Kaadsiinyo, Xaq raacid iyo Islaanimo iyo in Xaqa loo Yeedho Had iyo Jeer. An-Naml (27-35).

36. Markay soo Gaadhay Hadyaddii (Nabi) Sulaymaan Yuu Yidhi ma waxaad ii Kordhinaysaa Xoolo wuxuu I siiyey Eebe yaa ka khayr Roon wuxuu idin siiyey, Idinkaase ku Farxi Hadya diinna.

فَلَمَّا جَاءَ سُلَيْمَانَ قَالَ أَتُمِدُّونَنِ بِمَالِ أُمَّةٍ إِنِّي لَا الْقِبَالَ لَهُمْ لَبَّيْكَ وَسِعَمَا أُمَّةُكَ إِلَيْنَا أُنشُرْكُمْ وَتَفْرَحُوا ﴿٣٦﴾

37. Ee U celi Waxaana ula Imaanaynaa Junuud (Col) ayna Awoodayn waxaana ka Bixinaynaa Magaalada Iyagoo Dullaysan oo Ihaanaysan.

أَرْجِعْ إِلَيْهِمْ فَلَنَأْتِيَنَّهُمْ بِجُنُودٍ لَا قِبَالَ لَهُمْ لَبَّيْكَ وَلَوْ حَزَّبُوهُم مِّنْ قَبْلِكُمْ لَمَا ضَلُّوا عَنْ أَمْرِنَا إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا مِن قَبْلُ وَكَانَ أُولَئِكَ قَوْمًا فَاظِلِينَ ﴿٣٧﴾

38. Wuxuuna Yidhi Qoomow Yaa ii Keena Carshigeeda (Kursigeeda) ka hor Imaatinkooda Iyagoo Muslim ah.

قَالَ يَا أَيُّهَا الْمَلَأُوْاْ ائْتِكُمْ يَا بَنِي بَعْرَشٍ مَا قَبِلَ اَنْ يَأْتُوْنِي
مُسْلِمِيْنَ ﴿٢٨﴾

39. Wuxuuna Yidhi Mid Xoog badan oo Jin ah anaa kuu Keeni Intaadan ka Kicin Fadhigaada, waxaana ahay Xoog badane Aamina.

قَالَ عَفْرِيسٌ مِنَ الْجِنِّ اَنْ اَنَا اَبْرِيْكَ بِهٖ قَبِلَ اَنْ تَقُوْمَ مِنْ
مَقَامِكَ وَاِنِّي عَلَيَّهٖ لَقَوِيْٓ اٰمِيْنَ ﴿٢٩﴾

40. Wuxuuse yidhi kay Agtiisa ahayd Ogaanshaha Kitaabka Anaa kuu keeni Ishaada Laabideeda horteed (Ilbidhiqsi) Markuu ku Arkay Agtiisa Isagoo ku Sugan wuxuu Yidhi Kani waa Fadliga Eebahay inuu Imtixaamo inaan ku Mahdiyo iyo Inaan ka Gaaloobo, Ciddii ku Mahadisa wuxuu uun u Mahdiyey Nafitisa Ciddii Gaalowdana Eebahay waa ka Kaaftoonyahay waana Sharafbadanyahay.

قَالَ اَلَّذِيْ عِنْدَهُ عِلْمٌ مِّنَ الْكِتٰبِ اَنَا اَبْرِيْكَ بِهٖ قَبِلَ
اَنْ يَّرْتَدَّ اِلَيْكَ طَرَفُكَ فَلَمَّا رَاَهُ مُسْتَقِرًّا عِنْدَهُ قَالَ
هٰذَا مِنْ فَضْلِ رَبِّيْ لِيَبْلُوْنِيْٓ اَشْكُرْ اَمْ اَكْفُرْ وَمَنْ شَكَرَ
فَاِنَّمَا يَشْكُرُ لِنَفْسِهٖٓ وَمَنْ كَفَرَ فَاِنَّ رَبِّيْٓ عَنِّيْٓ زِيْرَةٌ ﴿٣٠﴾

Wuu Diiday Nabi Sulaymaan Hadyadii, wuxuuna ugu Goodiyey inuu ku Duulo, wuxuuna ka Codsaday Colkiisa in loo Keeno Kursigeedii ka hor Imaatinkeeda Iyadoo Muslim ah, Mid Xoog badan Yaana Yaboohay inuu Keeno intuusan fadhiga ka Kicin, waxaase ka Dhakhso badnaaday kan ku Keeni Ilbidhiqsi, Markii loo Keenay Kursigana wuxuu ku Mahadiyey Eebe'uuna Yaqiinsaday inay Imtixaan tahay Inuu ku Mahadiyo iyo Inkale, waana Taas Akhlaaqda Dadka Wanaagsan oo ah Inay ogyhiin in Nicmadu Imtixaan tahay in la Mahadiyo iyo in kale, oyna ahayn Faan, Isla wayni iyo Durbaan Tun. Mahadda Ilaahay iyo ku Xidhnaantiisana waa Hubka Mu'miniinta. Diidda iyo Isla Waynidana waa caadada Gaalada. An-Naml (36-40).

41. Wuxuuna Yidhi Dooriya Kursigeeda inay Garato iyo Inay Noqoto Cidaan Garanayn.

قَالَ نَسِكْرٌ وَّاٰهَامٌ عَرَشَهَا تَنْظُرُ اَتَهْتَدِيْٓ اَمْ تَكُوْنُ مِنَ
الَّذِيْنَ لَا يَهْتَدُوْنَ ﴿٣١﴾

42. Markay Timid waxaa lagu Yidhi ma sidanaa Kursigaagu, waxayna Tidhi waxaad Mooddaa Isagii (Wuxuuna yidhi) waxaa nala Siyey Horteed Cilmi waxaana nahay Muslimiin.

فَلَمَّا جَاثَتْ قَبِلَ اَهْكَاكًا عَرَشُكَ قَالَتْ كَاَنَّهُ هُوَ وَاُوَيْدِنَا
الْعٰلَمِيْنَ قَبْلِهَا وَكُنَّا مُسْلِمِيْنَ ﴿٣٢﴾

43. Waxaana (Xaqa) ka Reebay Waxay Caabudaysay oo Eebe ka soo Hadhay, waxayna ka mid ahayd Qoom Gaala ah.

وَصَدَّهَا مَا كَانَتْ تَعْبُدُ مِنْ دُوْنِ اَللّٰهِ اِنَّهَا كَانَتْ مِنْ
قَوْمٍ كٰفِرِيْنَ ﴿٣٣﴾

44. Waxaa lagu Yidhi Gal Daarta

قَبِلَ لَهَا اَدْخُلِي الصَّرْحَ فَلَمَّا رَاَتْهُ حَسِبَتْهُ لُجَّةً

Markay Aragtayna waxay U Malaysay Mawjad (Biya ah) waxayna ka Faydaytay Dhudhumadeeda, wuxuuna ku yidhi waa Daar Salaax Sugan oo Quruurado ah, waxayna Tidhi Eebow anigu waxaan Dulmiyey Naftayda, wa-xaana u Islaamay la Jirka Sulaymaan Ilaahay Dartiis ee Eebaha Caalamka ah.

وَكَشَفَتْ عَنْ سَاقِيهَا قَالَتْ إِنَّهُ صَرَخَ مُرَدًّا مِنْ قَوَارِيرٍ
قَالَتْ رَبِّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي وَأَسَأْتُ مَعَ سُلَيْمَانَ لِلَّهِ
رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٤٥﴾

Markii loo Keenay Kursigeedii yuu Faray Nabi Sulaymaan in la Dooriyi Tilmaamihisa Qaarkood inuu Imtixaamo inay Garato keedii inuu Yahay iyo in kale, markayse timid oo la warsaday inuu keedii yahay waxay Sheegtay in Isagii la Moodo, waxaana Xaqa U Diidanaa waxay Caabudaysay ee Ilaahay ka soo Hadhay, oy kuna Dhexnoolayd Qoom Gaalo ah, Markii la soo Dhawceeyey oy Aragtay Daar lala Yaabo iyo Xukunka Eebe Siyey Nabi Sulaymaan yey Qirtay Islaamka ooy u Hogaansantay Ilaaha Caalamka. Taasina waxay ku Tusin in Madaxda Muslimiinta laga Rabo inay Dadka Xaqa ugu Yeedhaan Siduu Falay Nabi Sulaymaan, oo Fali Jiray Nabigeenii-Muxamad ahaa (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) sidoo kale waxaa loo Baahan yahay in Xaqa la Raaco si Kastoos Yahay iyo Hawl kastoos hayo, iyo wax kastoos yahay, Illeen xaqa Horeeyey, Mudanna in La Raaco, oo la Rumeeyo. An-Naml (41-44).

45. Waxaan u Dirray Ree Thamuud Walaalkood Saalax inay Eebe Caabudaan Markaasay soo Bexeen iyagoo Labo Kooxooda oo Doodi.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا إِلَىٰ ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَالِحًا أَن
اعْبُدُوا اللَّهَ فَإِذَا هُمْ فَرِيقَانِ يَخْتَصِمُونَ ﴿٤٦﴾

46. Wuxuuna Yidhi Qoomkayow ma-xaad u Dedejisanaysaan Xumaan Wanaag ka Hor, Maadse Dambi Dhaaf Warsataan Eebe inuu idiin Naxariisto.

قَالَ يَا قَوْمِ لِرَبِّكُمْ تَسْتَعْجِلُونَ بِالسَّيِّئَةِ قَبْلَ الْحَسَنَةِ
لَوْلَا تَسْتَغْفِرُونَ اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٤٧﴾

47. Waxayna Dheheen waan ku Baasaysanay Adiga iyo Inta kula Jirta, wuxuuna ku Yidhi Baaskiinnu wuxuu Jiraa Eebe Agtiisa, waxaadse Tihiiin Qoom la Fidneeye.

قَالُوا أَطِیرْنَا بِكَ وَبِمَنْ مَعَكَ قَالَ طَائِرُكُمْ عِنْدَ اللَّهِ
بَلْ أَنْتُمْ قَوْمٌ مُّفْتَنُونَ ﴿٤٨﴾

48. Waxaana Magaalada ku Sugnaa Sagaal Qof oo Fasaadin Dhulka Hagaajinayna.

وَكَانَ فِي الْمَدِينَةِ تِسْعَةٌ رَهْطٍ يُفْسِدُونَ فِي
الْأَرْضِ وَلَا يُصْلِحُونَ ﴿٤٩﴾

49. Waxayna Dheheen isku Dhaarta Eebe inaan mirro isaga iyo Ehelkiisaba Markaas aan ku Dhahno Qaraabadiisa Maanaan Joogin Meeshuu ku Halaagmay Ehelkiisu waxaana Sheegaynaa Run.

قَالُوا تَقَاسَمُوا بِاللَّهِ لَنُبَيِّتَنَّهُ وَأَهْلَهُ ثُمَّ لَنَقُولَنَّ
لَوْ لَبِئْسَ مَا شَهِدْنَا مَهْلِكِ أَهْلِهِ
وَمَا لَئِن لَّصَدِيقُونَ ﴿٥٠﴾

Qisada Ree Thamud wax Badan Buu Quraanku ka Warramay waxayse Aayadahani Sheegeen iyo Qaybsameen, Sharaysteenna Nabigii iyo Intii la Jirtay, oyna Magaaladaas ku noolaayeen Sagaal Qof oo Qasayaal Dhagarta iyo Xumaanta Maleega, waxayna Isku Dhaarsadeen inay Dilaan Saalax iyo Ehelkiisa Goor Habeena uguna Dhaartaan Dadkiisa Inay Joogin Meeshii Lagu Dilay. Taasina waxay ku Tusin Dhibaatada iyo Balaayada inay u Horseedaan had iyo Jeer, oyna Waajib tahay in laga Digttoonaaado Xumaan wadayaasha, Maxayse ku Dambeeyeen, waa waxay Aayadaha Soo Socda inooga warrami. An-Naml (45-49).

50. Way Dhagreen Dhagar Annana waan dhagarnay Iyagoon Ogayn.

وَمَكْرًا وَمَكْرًا أَمْكِرُوا
لَا يَسْمَعُونَ ﴿٥٠﴾

51. ee Day Siday Noqotay Cidhibtii Dhagartooda Anagaa Halaagnay Iyagii iyo Qoomkoodiiba Dhammaan.

فَأَنْظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الْمُكْرِمِينَ ﴿٥١﴾
دَمَّرْنَا هُمْ وَقَوْمَهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٥٢﴾

52. Taasina waa Guryaahoodii oo Cidla ah Dulankoodii Dartiis, Arrintaasna Calaamad yaa ugu Sugaan Qoomkii wax Ogaan.

فَإِنَّكَ بَيْنَهُمْ خَاوِبَةٌ تِيمَانُ الْمَوْتَرِ فِي ذَلِكَ
لَايَةٌ لِّقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٥٣﴾

53. Waxaana Korinay kuwii Rumeeyay oo Dhawrsanayey.

وَأَحْبَبْنَا الَّذِينَ آمَنُوا وَمَنَّا يُتَّقُونَ ﴿٥٤﴾

Xumaan bay ka Shaqeyeen wayna la Rogmatay oo waxaa ku Dhacay Halaag iyo Khasaare, waxaana Cidloobay Guryaahoodii Dulankoodii Dartiis, waana Arrin ay ku waano iyo Wacdi Qaadato Ciddii wax kasi, waxaana la Koriyey Saalax iyo Qoomkiisii xaqa ku Taagnaa, Taasina waa Sannada iyo Caadada Eebe inuu Halaago Daalimiinta, Koriyana Mu'iniinta, Laga Yaabaa in Dulmiguo Muddo Joogo Laakiin ma Waaro, Saas Darteed yey Waajib tahay in lagu Waano Qaato Qisoooyinka Quraanka ee la soo Celceliyey wax Badan. An-Naml (50-53).

54. (Nabi) Ludh (Xusuuso) markuu ku Yidhi Qoomkiisii ma waxaad la Ima-naysaan Xumaan Idinkoo Arko.

وَلَوْطًا إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ أَتَأْتُونَ الْفَاحِشَةَ
وَأَنْتُمْ تُبْصِرُونَ ﴿٥٥﴾

55. Idinku ma Raggaad u Tagaysaan Doonid darteed Haweenka ka sokow, waxaadse Tihii Qoom Jaahiliina.

أَيُنْكِرُ كُرْتَاتُوتُ الرِّجَالِ شَهْوَةَ فِرْدُوسِ النِّسَاءِ
بَلْ أَنْتُمْ قَوْمٌ بِتِمْهَلَاتِكُمْ ﴿٥٦﴾

56. Mana Noqonin Jawaabtii Qoomkii-sa waxaan ahayn ka Bixiya Luudh iyo Ehelkiisa Magaaladiinna waa Dad Is-daahirine.

* فَمَا كَانَ جَوَابَ قَوْمِهِ إِلَّا أَنْ قَالُوا
أَخْرِجُوا آلَ لُوطٍ مِنْ قَرْيَتِكُمْ إِنَّهُمْ أَنَاسٌ
يَبْطَلُونَ ﴿٥٧﴾

57. Waana Korinay Isagii iyo Ehelkiisii Haweenaydiisii mooyee, waxaan ku Qaddaraay (ka dhignay) kuwa Halaag-sami.

فَأَجْبَدْتُهُمْ وَأَهْلَكَهُمْ إِلَّا أُمَّرَأَتَهُ قَدَرْنَا مَحَاسِنَ
الْعَالَمِينَ ﴿٥٨﴾

58. Waxaana ku soo Daadinay korkooda Roob (Dhagax Naara) waxaana Xumaaday Roobka kuwa Loo Digay. ﴿٥٨﴾ وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِمْ مَطَرًا قَسِيًّا مَطَرًا الْمُنْدَرِيَّةِ

Qoomkii Nabi Luudh waxay ku Magac Bixiyeen inay Ragga wax ka Dayan Jireen intay Haween Guursan lahaayeen, taasina waa Arrin Ceeb ku ah Binii Aadamka, kuna tusin Jaahilimo iyo Fasaad intay ka Eryaan Nabi Luudh iyo Intii Rumaysay Iyagoo ku Caayi inay Nadiif Yihiin, waxaase la Yaab ah inay Nadiifi Ceeb ku Ahayd Qomkaa Agtooda kuna tahay Had iyo Jeer kuwa Xun Xun, Eebese waa Koriyey Luudh iyo Mu'miniinta, oo Halaagay Gaaladii oo Haweeneydiisii ku Jirto, waana wax lagu Waano qaato. An-Naml (54-58).

59. Waxaad Dhahdaa mahad Eebaa iska leh Nabadgalyana ha Ahaato Addoomadiis uu Doortay Korkooda, ma Eebaa Khayr roon mise waxay la Wadaajin. ﴿٥٩﴾ فَلِلْحَمْدِ لِلَّهِ وَسَلَّمَ عَلَىٰ عِبَادِهِ الَّذِينَ أَصْطَفَيْنَا اللَّهُ خَيْرًا مَّا يُسْرِكُونَ

60. Ma Eebaha Abuuray Samooyinka iya Dhulka oo idiinka soo Dejiyey Samada Biyo oon ku soo Bixinay Beero Qurux Badan (Miya Khayrroon mise waxaad Caabudaysaan) ma kari kartaan inaad Soo bixisaan Geedkeeda, ma Ilaah kalaa jira Eebe Miciis, waasw Qoom (xaqa) ka Leexaan.

﴿٦٠﴾ أَمْنَ حَقَّقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَأَنْزَلَ لَكُمْ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَنْبَتْنَا بِهِ حَدَائِقَ ذَاتَ بَهْجَةٍ مَّا كَانَ لَكُمْ أَنْ تُنبِتُوا شَجَرَهَا أَلَيْسَ اللَّهُ بِذِي بُلُوٍّ هُمْ قَوْمٌ يَعِدُونَ

61. Mise (waxaa Khayr roon) Eebaha ka Yeelay Dhulka Sugnaan, oo U yeelay wabiyo, buuro oo u Yeelay Badaha Dhexdooda Soohdin, ma Ilaah kalaa Jira Eebe Miciisa, Badankooduse wax ma Oga. ﴿٦١﴾

﴿٦١﴾ أَمْنَ جَعَلَ الْأَرْضَ قَرَارًا وَجَعَلَ خِلَالَهَا أَنْهَارًا وَجَعَلَ لَهَا رَوَاسِيًّا وَجَعَلَ بَيْنَ الْبَحْرَيْنِ حَاجِزًا أَلَيْسَ اللَّهُ بِذِي كَرَمٍ لَّا يَعْمُرُونَ

Wuxuu Eebe Faray Nabiga (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Yidhaahdo Mahad Eebaa iska leh, Nabadgalyona ha ahaato Addoomada Eebe Doortay korkooda, Taasoo ah inay Xumaan iyo Qas ka Nabadgalaan, Tan kale waxaa Wanaag badan Eebaha Abuuray Cirka iyo Dhulka oo Roobka keena Kuna soo Bixiya Doog iyo Beero aan Cid kale soo Bixin karin, oo Dhulka ka Yeelay meel lagu Sugnaado, yeelayna Dhexdiisa Wabiyo iyo buuro, Badahana kala dhawra, Isagaana ah Ilaaha Xaqa, wax la mid ah ama Mudan in lala Caabudana ma jiro, wuxuuna Mudanyahay Waynayn iyo Caabudid. An-Naml (59-61).

62. Mise Eebaha Aqbala ka Dhibban markuu Baryo oo Fayda Xumaanta (Dhibka) idinkana Yeeli kuwa Dhulka

﴿٦٢﴾ أَمْنَ يُجِيبُ الْمُضْطَرَّ إِذَا دَعَاهُ وَيَكْشِفُ السُّوءَ وَجَعَلَ لَكُمُ خُلْفَاءَ الْأَرْضِ أَلَيْسَ اللَّهُ

u Hadhi (Iska Baddala), ma Ilaah kalaa Jira Eebe Miciisa, Yaraa Intaad wax Xusuusanaysaan.

فَلَيْلًا مَا تَذَكَّرُونَ ﴿٦٢﴾

63. Mise Eebaha idin Toosiya Mugdiyada Barriga (Dhulka) iyo Badda Dhexdeeda, oo Ah kan Dira Dabaylaha oo Bishaarayn Naxariista Eebe (Roobka) hortiisa, ma Ilaah kalaa Jira Eebe Miciisa, Eebaa ka Sarreeya waxay la Wadaajin.

أَمَّنْ يَهْدِيكُمْ فِي ظُلُمَاتِ اللَّيْلِ وَالْبَحْرِ وَمَنْ يُرْسِلِ الرِّيْحَ بُشْرًا بَيْنَ يَدَيْ رَحْمَتِهِ ۗ أُولَٰئِكَ مَعَ اللَّهِ ۗ تَعَلَّى اللَّهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٦٣﴾

64. Mise Eebaha Billaaba Khalqiga (Abuurkiisa) Haddana soo Celin, oo ah kan Idinka Arzaaqa Samada iyo Dhulkaba, ma Ilaah (kalaa) Jira Eebe Miciisa, waxaad Dhahdaa Keena Xujadiina Haddaad Run Sheegaysaan.

أَمَّنْ يَبْدَأُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ ۚ وَمَنْ يَرْتَفِكُمْ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ ۗ أُولَٰئِكَ مَعَ اللَّهِ ۗ قُلْ هَٰؤُلَاءِ زُهْرَتُهُمْ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٦٤﴾

Ilaahaybaa Ajiiba kan Dhibban Dadkana kala Badala in la Xusana Mudan, Sidoo kale Isagaa Toosiya Mugdiyada Mudanna inaan Cid kale lala Caabudin, Billaabana Abuuridda'Soona Celiya Dadka, Arzaaqaana Dadka.

Nabigana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Markii la Warsaday Maxaad u Yeedhi, waxaan u Yeedhi Eebaha Hadduu ku Taabto Dhib ood barido kaa Fayda, kan Baadida kuu soo Celiya, kan Abaartu markay ku Hesho kaa Bixiya. waxaa wariyey (Imaam Axmed). Saasay Xaq u tahay in lagu Dhaqmo Sharcigiisa, loona Hogaansamo. An-Naml (62-64).

65. Waxaad Dhahdaa ma Oga waxa Samooyinka iyo Dhulka ku Sugaan waxa Maqan Eebe mooyee, mana Oga Goorta la Soo Bixin.

قُلْ لَا يَعْلَمُونَ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ الْعِزْبَ إِلَّا اللَّهُ ۗ وَمَا يَشْعُرُونَ أَيَّانَ يُبْعَثُونَ ﴿٦٥﴾

66. Wuxuuse Gaadhay Cilmigoodu Aakhiro (Buuxsami) waxayse kaga Suganyihiin Xageeda Shaki, wayna ka Indho La'yihiin Xageeda.

بَلْ أَدْرَكَ عِلْمُهُمْ فِي الْآخِرَةِ ۗ بَلْ هُمْ فِي شَكٍّ مِنْهَا ۗ بَلْ هُمْ عَنْهَا عَمُونَ ﴿٦٦﴾

67. Waxay Dheheen kuwii Gaaloobay Markaan Noqonno Carro Anaga iyo Aabayaalkanno miyaa nala soo Bixin.

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَوَإِنَّمَا نُنَادِيكُم بِآبَائِكُمْ إِنَّا رَبُّكُمُ الْأَوَّلِينَ ﴿٦٧﴾

68. Waa Naloo Yaboohay Kan (soo Bixinta) Anaga iyo Aabayaalkanno mar hore, kannna ma aha waxaan Warkii Dadkii hore ahayn.

لَقَدْ وَعَدْنَا هَٰؤُلَاءِ نَحْنُ وَآبَاؤُهُمْ مِنْ قَبْلُ ۖ إِنَّ هَٰذَا إِلَّا أَسْطُورٌ الْأَوَّلِينَ ﴿٦٨﴾

69. Waxaad Dhahdaa ku Socda Dhulka oo Daya siday Noqotay Cidhibtii Dam-biilayaasha.

قُلْ سِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَانظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الْمُجْرِمِينَ ﴿٦٩﴾

70. Hana u Murgin Korkooda, hana ka Cidhiidhyamin waxay Dhagri.

وَلَا تَحْزَنْ عَلَيْهِمْ وَلَا تَكُنْ فِي ضَيْقٍ مِمَّا يَمْكُرُونَ ﴿٧٠﴾

Wax Maqan Cid og oon Eebe ahayn ma Jiro, mar Dadka la soo Bixin Cid og oon Ilaahay ahayna ma Jiro, Maxayse Tari wax Ogaan marka Aakhiro la tago, Addunkay ku Wanaagsantahay inaad Xaqa Ogaatid, oodan ka Indho La'aan, Diididda soo Bixinta, Xaqiridda Xaqa iyo Cidda u Yeedhina waa Caadada Gaalada Xaq diidayaasha ah, Hase Socdeen Dhulka oo ha ku Waano Qaateen siday Noqotay Cidhibtii Dambiilayaasha.

Waxaana Eebe Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelee) Inuusan ka Murugoonin Cidhiidhina is Galinin, Taasina, waxay Waano Guud u Tahay iyo wax ku Qaadasho kuwa Xaqa u Yeedha Goor kasta. An-Naml (65-70).

71. Waxayna Odhan waa Goorma Yaboohaasi Haddaad Run sheegay-saan.

وَيَقُولُونَ مَتَى هَذَا الْوَعْدُ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٧١﴾

72. Waxaad Dhahdaa waxaa Suurowda inay Dhawdahay waxaad Dedejisanay-saan Qaarkeed.

قُلْ عَسَى أَنْ يَكُونَ رَدِفٌ لَكُمْ بَعْضُ الَّذِي تَسْتَعْجِلُونَ ﴿٧٢﴾

73. Eebahaana waa Fadli Siiyaha Dadka, Laakiin Badankoodu kuma Mah-diyaan.

وَلَنْ رَيْبَكَ لَدُوْ قَضِيلٍ عَلَى النَّاسِ وَلَكِنَّ أَعْيُنَهُمْ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٧٣﴾

74. Eebahaana wuxuu Ogyahay Waxay Qarin Laabahoodu iyo waxay Muujin.

وَلَنْ رَيْبَكَ لِعِلْمِ مَا تَكْنُ صُدُورُهُمْ وَمَا يَعْلَمُونَ ﴿٧٤﴾

75. Waxa ku Maqan Samada iyo Dhulkana waxay ku Suganyihiin Ki-taab Cad.

وَمَا مِنْ غَائِبَةٍ فِي السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ إِلَّا فِي كِتَابٍ مُّبِينٍ ﴿٧٥﴾

76. Quraankanna wuxuu ka Qisoon (Warrami) Banii Israa'iil wixii Badnaa ay isku Khilaafeen.

إِنَّ هَذَا الْقُرْآنَ يَفُضُّ عَلَىٰ بَنِي إِسْرَائِيلَ أَمَّا ذُو الَّذِي هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٧٦﴾

77. Quraankuna waa Hanuun iyo Naxariista Mu'miniinta.

وَأَنَّهُ رَهْدَىٰ وَرَحْمَةً لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٧٧﴾

78. Eebahaana wuxuu ku kala Xukumi Dhexdooda Xukunkiisa waa Adkaade Og.

إِنَّ رَبَّكَ يَقْضِي بَيْنَهُم بِحُكْمِهِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْعَلِيمُ ﴿٧٨﴾

waxa Laabta ku Jira iyo waxa la muujinba. Cirka iyo Dhulka waxa ku maqanna waxay ku Suganyihiin Kitaab Cad oo Koobay. Quraankuna wax Badan yuu ka Warramay siday Isu Khilaafeen Banii Israa'iil, waana Hanuunka iyo Naxariista Mu'miniinta, Eebaana kala Xukumi Dadka Xukun Caadil ah, isagoon wax la awood ahna jirin, wax kastana og. oyna waajib tahay in loo Noqdo, loo Hogaansamo, Dhabna loo Caabudo. An-Naml (71-78).

79. ee Talo Saaro Eebe Adugu waxaad ku Sugantahay Xaq Cade.

فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ إِنَّكَ عَلَى الْحَقِّ الْمُبِينِ ﴿٧٩﴾

80. Adugu wax ma Maqashiisid kuwa Dhintay mana Maqashiisid Dhagoolaha Dhawaaq markay Jeedsadaan iya-goo sii Socda.

إِنَّكَ لَا تَسْمَعُ الْمَوْتَى وَلَا تَسْمَعُ الدُّعَاءَ إِذَا وُلِّتُوا مُدْبِرِينَ ﴿٨٠﴾

81. Mana Tihid mid ka Toosin kara Indhoolaha Baadidiisa, waxna ma maqashiin kartid Ruux Rumeeyey Aayaadkanaga oo Muslima mooyee.

وَمَا أَنْتَ بِهَادِي الْعُمَىٰ عَن صَلَاتِهِمْ ۖ إِنَّ تَسْمَعُ إِلَّا مَن يُؤْمِنُ بِبَيِّنَاتِنَا فَهُمْ مُّسْلِمُونَ ﴿٨١﴾

82. Markuu ku Dhaco Korkooda Qawl-kii (Ciqaabtii) waxaan u soo Bixinnaa Daabbaddii Dhulka oo la Hadli Dad-kuna waxay ahaayeen kuwaan Yaqiin-sanayn Aayaadkanaga.

* وَإِذَا وَقَعَ الْقَوْلُ عَلَيْهِمْ أَخْرَجْنَا آلَهُمْ دَابَّةً مِّنَ الْأَرْضِ تُكَلِّمُهُمْ أَنَّ النَّاسَ كَانُوا بِآيَاتِنَا لَا يُوقِنُونَ ﴿٨٢﴾

83. Xusuuso Maalintaan ka soo Kulmi-nayno Ummad kasta Koox ka mid ah kuwii Beeniyey Aayaadkanaga iyagóo is Cidhiidhyi.

وَيَوْمَ نَخْشَىٰ مِنْ كُلِّ أُمَّةٍ فَوْجًا مَّمَّنَ بِكُذِّبَ بِآيَاتِنَا فَهُمْ يُوزَعُونَ ﴿٨٣﴾

84. Markay Yimaaddaanna wuxuu ku Dhahaa Miyaad Beeniseen Aayaadkay-gii idinkoon koobin Ogaansho, Ma-xaadse Fali Jirteen.

حَتَّىٰ إِذَا جَاءَهُمْ وَقَالَ آكَلْتُمْ بَيِّنَاتِي وَتَمَرْتُمْ حُطُوبَهَا ۖ عَلِمْنَا أَمَّاذَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٨٤﴾

85. Waxaa ku Dhacay Qawl-kii (Ciqaab-tii) Dulmigooda Dartiis mana Had-layaan.

وَوَقَعَ الْقَوْلُ عَلَيْهِمْ بِمَا ظَلَمُوا فَهُمْ لَا يَنْطِقُونَ ﴿٨٥﴾

86. Miyeyna Arkayn inaan uga Yeellay Habeenka inay ku Xasilaan, Maalinta-na Arag, Arrintaasna Calaamooyin yaa ugu Sugaan Ciddii Rumayn (Xaqa).

أَلَمْ يَرَوْا أَنَّا جَعَلْنَا اللَّيْلَ لَيْسَكُنُ فِيهِ وَالنَّهَارَ مُبْصِرَاتٍ ۚ فِى ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٨٦﴾

Waana Inay Ilaahay Talo Saarato Cidda Xaqa ku Toosan oo ah inay waxa la Faray Falaan, ka Dibna Eebe ku Kalsoonaadaan, cid Xaqa ka Dhaga la'na oo ka Indho la'na Ruux Hanuunin kara oo Ilaahay ahayn Ma jiro.

Markay Qiyaamadu Imaanna waxaa soo Bixi Daabbad la Hadli Dadka, waxaa loo soo kulmin Ummad kasta Kooxihii Beenin Jiray Xaqa, laguna Canaanin inay xaqa beeniyeen Iyagoon Koobin Cilmigiisa, waxaana ku Dhici Ciqaab Dulmigooda Dartiis. Habeenka iyo Maalintana Waano ugu Filan Ciddii Rumeyn. Qiyaamadana waxa ka Horeeya Toban Calaamo Sida Sugan. An-Naml (79-86).

87. Xusuuso Maalinta la Afuufi Suurka oos Argagixi waxa ku Sugan Samooyinka iyo Dhulka Cidduu Eebe Doono Mooyee, Dhammaanna way u Imaan Eebe Iyagoo Dullaysan.

وَيَوْمَ يُنْفَخُ فِي الصُّورِ فَفَزِعَ مَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَمَنْ فِي الْأَرْضِ إِلَّا مَنْ شَاءَ اللَّهُ وَكُلُّ أَتَوْهُ دَاخِرِينَ ﴿٨٧﴾

88. Waxaadna Arkaysaa Buurihii ood u Malayn inay ingagantahay (Sugantahay) iyadoo u Socota sida Daruuraha, waase Sancada Eebaha Sugay wax kasta, Eebana waa Ogaha waxaad Falaysaaan.

وَرَى الْجِبَالِ تَحْسَبُهَا جَامِدَةً وَهِيَ تَمُرٌّ مَرَّ السَّحَابِ صُنِعَ اللَّهُ الَّذِي أَنْقَضَ كُلَّ شَيْءٍ إِنَّهُ خَبِيرٌ بِمَا تَفْعَلُونَ ﴿٨٨﴾

89. Ciddii la Timaadda Wanaag wuxuu Mudan wax ka Khayr roon Argagaxa Maalintaasna Iyagu way Aamin Noqon.

مَنْ جَاءَ بِالْحَسَنَةِ فَلَهُ خَيْرٌ مِنْهَا وَهُرَيْرٌ مِّنْ يَوْمَئِذٍ ءَامِنُونَ ﴿٨٩﴾

90. Ciddiise la Timaadda Xumaan waxaa Loogu Tuuri Wajiga Naarta, miyaa Laydinka Abaal Mariyaa waxaad Falayseen Mooyee.

وَمَنْ جَاءَ بِالسَّيِّئَةِ فَكَيْتٌ وَجُوهُهُمْ فِي النَّارِ هَلْ يُخْجَرُونَ إِلَّا مَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٩٠﴾

Eebe wuxuu ka Warrami in Suurka la Afuufi oos Dhiman Ruux kasta waxa Eebe Reebo mooyee, Doorsoon Badanna Dhici, Sida Buuraha, Dhulka, iyo Dadkuba, Ilaahense waa kan Sugay Abuurka wax kasta, wax Walbana Og, Wanaaggana Wanaag ku Abaal mariya iyo wax ka sii fiican, Xumaantana Naar ku Abaal mariya isagoon Dulmiyeyn, Qiyaamaduna waa Maalin wayn oo Quraanku wax Badan ka Digay, oyna Habboontahay in loo Darbado, loona Shaqaysto, kaasoo ah Wanaag falid, Xumaan ka Fogaansho iyo Xaq Raacid, waana Maalinta Carruurta Cirroole ka Yeeli, Cidna cid kale wax u Tarayn, in Eebe Doono Mooyee. An-Naml (87-90).

91. Waxaa uun Lay Faray inaan Caabudo Eebaha Baladkan (Maka) ee ah kan Xarrimay oo wax kastana iska leh, waxaana lay Faray inaan ahaado Muslimiinta.

إِنَّمَا أَمْرُهُ أَنْ أَعْبُدَ رَبَّ هَذِهِ الْبَلَدَةِ الَّذِي حَرَّمَهَا وَلَهُ كُلُّ شَيْءٍ وَأَمْرُهُ أَنْ أَكُونَ مِنَ الْمُسْلِمِينَ ﴿٩١﴾

92. iyo Inaan Akhriyo Quraanka Ruuxiise Hanuuna wuxuu uun u Hanuunay Naftiisa, Ruxiise Dhuma waxaad dhah-

وَأَنْ أَتْلُو الْقُرْءَانَ فَمَنْ أَهْتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهْتَدَىٰ لِنَفْسِهِ وَمَنْ ضَلَّ فَقُلْ إِنَّمَا أَنَا مِنَ الْمُنذِرِينَ ﴿٩٢﴾

daa Anugu waxaan uun ahay kuwa Diga.

93. Waxaadna dhahdaa Mahad Eebaa iska leh wuxuu idin tusin Aayaadkiisa oo Aqoonsanaysaan, mana aha Rabbi-gaa mid Halmaansan waxaad Falaysaan.

وَقُلِ الْحَمْدُ لِلَّهِ سُبْحَانَ رَبِّكَ رَبِّ الْعَالَمِينَ فَتَعَرَّفُوا بِهَا وَمَا رَبُّكَ بِغَافِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٩٣﴾

Eebe wuxuu Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee) inuu Caabudo Ilaaha Magaalada Barakaysan ee Maka, ee Xurmeeyey, iyo inuu u Hogaansamo, Quraankana Akhriyo, Illeen Ciddii Hanuunta wuxuu uun wax u Taray Naftiisa, tii Dhuntana waxay uun Dhibtay Nafteeda.

Nabigana Waxaa uun Saaran u Digid iyo Gaadhsiin Xaqa, Mahadna Eebaa iska leh, Dadkana Tusin doona Aayaadkiisa si ay Xujadu u Qabato, wax uu ka Halmaansanyhay waxay Falina ma jirto, Magaalo walba Eebaa iska leh ee waxaa Maka loo Sheegay Sharafteeda. Waxaana Sugnaatay in la Reebyay Goynta Geedaheeda, Dilidda Uggadheeda, iyo Qaadidda Baadideeda, Cidaan Yaahdinayn. Si kastood tahayna Eebe waa ku Ogyahay.

Cumar Binu Cabdi Casiis wuxuu Yidhi: Eebe ma Halmaamo xataa Boodhka ku Kiciso Gomadaha Dadka. An-Naml (91-93).



Suurat Al-Qaşaş



Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Wuxuu ku Tusin Mucjisada Quraanka.

طسّر ﴿١﴾

2. Taasina waa Aayaadka Kitaabka (Quraanka) ee Cad.

تِلْكَ آيَاتُ الْكِتَابِ الْمُبِينِ ﴿٢﴾

3. Waxaannu kugu Akhrin Korkaaga Warkii (Nabi) Muuse iyo Fircoon si Xaq ah Qoomkii Rumayn.

نَسُوا آيَاتِكَ مِنْ بَنِي مُوسَىٰ وَفِرْعَوْنَ بِالْحَقِّ لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٣﴾

4. Fircoon wuu Isku Kibriyey Dhulka (Masar) wuxuuna ka Yeelay Ehelkiisii Kooxo, Isagoo Yaraysan (Dullayn) Koox ka Mid ah Gawricina Wiilashooda oo Dayn Haweenkooda wuxuuna ka mid ahaa kuwa wax Fasaadiya.

إِنَّا فِرْعَوْنَ عَلَا فِي الْأَرْضِ وَجَعَلْنَا آهْلَهُهَا شِيعَةً يُسْتَضَعُونَ طَائِفَةً مِنْهُمْ يُدْعُونَ آبَاءَهُمْ وَيَسْتَحْيُونَ نِسَاءَهُمْ إِنَّهُمْ مِنَ الْمُفْسِدِينَ ﴿٤﴾

5. Waxaanu u Dooni inaan ku Mannaysanno (Waxsiinno) kuwii lagu Dullaysanayay Dhulka kana yeello Imaamyo, kana Yeello kuwa Dhaxli Dhulka.

وَرُؤُوسًا ثَمُنًا عَلَى الَّذِينَ اسْتَضَعُوا فِي الْأَرْضِ وَجَعَلْنَا لَهُمْ آيَمَةً وَجَعَلْنَا لَهُمُ الْوَارِثِينَ ﴿٥﴾

6. Oon Makansiinno Dhulka, Tusinaya Fircoon iyo Haamaan iyo Januuddooda waxay ka Digtoonaayeen (Halaa-gooda).

وَأَمْكَنَّا لَهُمْ فِي الْأَرْضِ وَنُرِي فِرْعَوْنَ وَهَمَانَ وَجُنُودَهُمَا مِنْهُمْ مَآكِلًا أَنْوَاجًا ذُرُورًا ﴿٦﴾

Suuraddan waxay si Gooni ah uga Warrantay wixii Dhexmaray Nabi Muuse iyo Daalimkii Fircoon ahaa, ee Isku Kibriyey kalana Qaybiyey Dadkii, Wiilashana Laaey Gabdhahana Shaqo u Reebtay, hase yeeshee wuxuu Eebe Qaddaray in kuwii la Dullaysan jiray oo Xaq Rumeeyey ay Dhulka u Hadhaan, Madaxna, Noqdaan, Fircoon iyo Gacanyarihiisii u Dhaga Nuglaa ee Haamaan iyo Colkiisiina la Tusiyo waxay ka Cabsanayeen oo ah in Xukunka laga Qaado. Qudrada Eebe iyo Awooddiisa iyo wuxuu Xukumana wax Qiyaasi ama Ogaan ma Jiro. Al-Qaşaş (1-6).

7. Waxaan u Waxayoonay ku (Ilhaamaynay) Muuse Hooyadiis Nuuji, mar-

وَأَوْحَيْنَا إِلَىٰ آلِ مُوسَىٰ أَنْ أَرْضِعِيهَا فَاذْخِفِي

kaad u Cabsatana ku Tuur Hirka (Badda) hana Cabsan hana Murugoon anagaa kugu soo Celine kana Yeeli kuwa la Diro (Rasuul).

عَلَيْهِ فَأَلْقِيهِ فِي الْيَمِّ وَلَا تَحْزَنِي وَلَا تَحْزَنِي
إِنَّا رَأَوُوهُ إِلَيْنِكَ وَجَاءَهُوْهُ مِنَ الْمُرْسَلِينَ ﴿٧﴾

8. Waxaana Qaatay Fircoon Dadkiisii Isagoo u Noqon doona Col iyo Walbahaar, Fircoon iyo Haamaan iyo Col-koodiina waxay Ahaayeen kuwo Gefay.

فَأَلْقَاهُ فِي يَمِّ فِرْعَوْنَ لِيَكُونَ لَهُمْ عَدُوًّا
وَحَزَنًا إِنَّ فِرْعَوْنَ وَهَمْدَانَ وَجُنُودَهُمْ كَانُوا
خَالِفِينَ ﴿٨﴾

9. Waxayna Tidhi Haweenaydii Fircoon waa Raaxada Ishayda iyo taada ee ha Dilina, waxay u Dhawdahay inuu ina Anfaco ama aan ka yeelanno Wiile, mana Oga Iyagu (Dhabta).

وَقَالَتْ أُمَّرَأَةٌ فِرْعَوْنَ قُرَّتْ عَيْنَيْهَا لِوَلَدٍ
لَّا تَقْبَلُوهُ عَسَىٰ أَن يَنْتَفِعَنا أَوْ يَخْذَهُ، وَوَلَدًا
وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٩﴾

Waa la Dhalay Nabi Muuse, Hooyadiina way u Cabsatay, waxaana Eebe ku Ilhaameeyey inay Badda ku Tuurto isagoo Weel Ku Jira, wuxuuna Ilahay ku Tuuray Qalbigeda inayan Cabsanin, Murginna, Maxaa yeelay wuu ku soo Celin, kana Yeeli Rasuul, waxaase Helay Fircoon Colkiisii Isagoo ku Noqon doona Naxdin iyo Col, Haweenaydii Fircoon markay Aragtay yey ku Tidhi Fircoon ha dilina waa Nuurka iyo Raaxada Indhaheennee waxayna u Dhawdahay inuu ina Anfaco ama aan Wiil ka Dhigannee, mana oga wuxuu Xaalku ku Dambayn. Waxaa la Sheegay in Fircoon Yidhi: Aduu kuu yahay Raaxada Indhaha Anise iima aha, waxayna Noqotay Sidii. Al-Qaşaş (7-9).

10. Wuxuu Ahaaday Qalbigii Muuse Hooyadiis mid Madhan waxayna u Dhawaatay inay Muujiso Haddaanaan Adkaynin Qalbigeda inay ahaato Mu'miniinta.

وَأَصْبَحَ فُؤَادُ أُمِّ مُوسَىٰ فَارِغًا إِن كَادَتْ لَتُبْدِي
بِهِ لَوْلَا أَن رَّبَطْنَا عَنك قَلْبَهُ لَتَكُونُ مِنَ
الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠﴾

11. Waxayna ku Tidhi Walaashiis Raac, waxayna ka eegaysay Dhinac Fog, iyagoon oqayn.

وَقَالَتْ لِأُخْتِهِ قُصِّيهِ قُصِرَتْ بِهِ عَنْ جُنُبٍ
وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿١١﴾

12. Waxaana ka Reebnay Korkiisa Nuugmada Horay, waxayna Tidhi Gabbadhii Maydin Tusiyaan Qoys idiin Dhaqaalayn una Samo Fali.

* وَحَرَمْنَا عَلَيْهِ الْمَرَاضِعَ مِن قَبْلُ فَقَالَتْ هَلْ
أَدُلُّكُمْ عَلَىٰ أَهْلِ بَيْتٍ يَكْفُلُوْنَهُ، لَكُمْ وَهْمٌ لَهُمْ
تَكْفُلُونَ ﴿١٢﴾

13. Waxaana ku soo Celinay Hooyadiis, si ay u Raaxaysato Isheedu una Murgin, Ogaatana in Yabooha Eebe Yahay Xaq Laakiin Dadka Badankiisu ma Oga.

فَرَدَدْنَاهُ إِلَىٰ أُمِّهِ كَيْ تَقَرَّ عَيْنُهَا وَلَا تَحْزَنَ
وَلَنَعْلَمَنَّ أَنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٣﴾

Way Walbahaartay Nabi Muuse Hooyadiis markii la Helay Wiikeedii, waxayna u Dhawaatay inay Sheegto ee Eebaa Adkeeyey Qalbigeeda, kana Yeelay Mu'minad, waxayna Fartay Gabadh Walaashiis ah inay Dabo socoto kana Fiiriso meel Durugsan si ay ula Socoto Xaalka iyagoon Ogayn, wuuse Diiday Nuugmadii Haween kale Illeen Ilaahbaa horay u Qaddaraye, waxayna U sheegtay Gabadhii inay Hayso Qoys Dhaqaalayn, saasna Eebe ugu soo Celiyey Nabi Muuse Hooyadiis in Isheedu Qabowdo, oyna Nixin, Ogaatana in Yabooha Eebe Xaq Yahay, Dadka Badankiise Ogayn.

Waxaa Xadiith ah: Ruuxii Shaqayn oo Khayr ula Jeeda Shaqada wuxuu la mid yahay Nabi Muuse Hooyadiis Wiilkeediina way Nuujisay ujuurana way ka Qaadatay. Al-Qaşaş (10-13).

14. Markuu Gaadhay (Nabi) muuse Xooggiisa oo Ekaaday Yaan siinay Xigmo iyo Cilmi, Saasaana ku abaal Marinaa Sama Falayaasha.

وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُ، وَأَسْرَىٰءَ اتَيْنَهُ حُكْمًا وَعِلْمًا، وَكَذَلِكَ
تَجْرَى الْمُحْسِنِينَ ﴿١٤﴾

15. Wuxuuna Galay Magaaladii Waqti aan Dadkeedu ogayn, wuxuuna Helay Labo Nin oo Dagaallami, oo Kaasi Yahay Qaraabadiisa kaasna Yahay Colkiisa, waxaana u Kaalmo warsaday kii Qaraabadiisa ahaa Colkiisa (Korkiisa) wuuna Feedhay Muuse wuuna Dilay, wuxuuna Yidhi waa Camal Shaydaan, Isaguna waa Col Baadiyeeya oo Cad.

وَدَخَلَ الْمَدِينَةَ عَلَىٰ حِينٍ غَفْلَةٍ مِنْ أَهْلِهَا فَوَجَدَ فِيهَا
رَجُلَيْنِ يَمْتَنِلَانِ هَذَا مِنْ شِيعَتِهِ وَهَذَا مِنْ عَدُوِّهِ
فَأَسْتَعْنَاهُ الَّذِي مِنْ شِيعَتِهِ عَلَى الَّذِي مِنْ عَدُوِّهِ
فَوَكَرَهُ مُوسَىٰ فَقَضَىٰ عَلَيْهِ قَالَ هَذَا مِنْ عَمَلِ
الشَّيْطَانِ إِنَّهُ عَدُوٌّ مُضِلٌّ مُبِينٌ ﴿١٥﴾

16. Wuxuu Yidhi Eebow Anigu waxaan Dulmiyey Naftayda ee ii Dambi Dhaaf wuuna u Dambi Dhaafay Illeen Ilaahay waa Dambi Dhaafe Naxariistee.

قَالَ رَبِّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي فَاغْفِرْ لِي فَغَفَرَ لَهُ إِنَّهُ
هُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ ﴿١٦﴾

17. Wuxuuna Yidhi Eebow Nicmadaad ii Nicmaysay Darteed Yaanan Noqonin mid u Kaalmeeya Dambilaayaasha.

قَالَ رَبِّ إِنَّمَا أَنْعَمْتَ عَلَيَّ فَلَنْ أَكُونَ ظَاهِرًا
لِلْمُجْرِمِينَ ﴿١٧﴾

Wuu Waynaaday Nabi Muuse Markaasuu Eebe u Waxyooday Illeen wuxuu ahaa Sama Falee, markuu Galay Magaaladii Manfiis Iyadooy Tahay Waqti aan la Ogayn, yuu Arkay Labo Nin oo Midna yahay Qoomkiisii midna Coliisii oo Dagaalami, markuu ka Hiil doonayna wuxuu Feedhay kii Colka ahaa wuuna Dilay, Hase yeesh ee wuu Qoomameeyey oo Shallaayey Illeen lama Farine, wuuna Toobakeenay, Eebana waa ka Aqbalay Illeen waa Toobad Aqbalee. Al-Qaşaş (14-17).

18. Wuxuu ku Waabariistay Magaaladii Isagoo Cabsan oo Sugi (Dhib) Markaasuu ku soo Baxay kii Gargaarka Warsaday Shalay oo Qaylyi, wuxuuna ku yidhi Muuse Adugu waxaad tahay baadi cad.

فَأَصْبَحَ فِي الْمَدِينَةِ حَايِفًا يَتَرَقَّبُ فَإِذَا الَّذِي
أَسْتَصْرَفُ بِالْأَمْسِ يَسْتَصْرِخُهُ قَالَ لَهُ، مُوسَىٰ
إِنَّكَ لَعَوَى مُبِينٌ ﴿١٨﴾

19. Markuu Doonay inuu Qabto (Wax yeelo) kii Colka u ahaana wuxuu yidhi (kii loo gargaarayey) Muusow ma waxaad dooni inaad I disho Sidaad u Dishay Naf (Kale) Shalay, ma Doonaysid inaad waxaan Jabbaar (Kibir badane) ahayn Dhulka ku Noqoto, mana Doonaysid inaad Noqoto kuwa wax Wanaajiyaa.

فَلَمَّا أَنْ أَرَادَ أَنْ يَنْطَلِقَ بِالَّذِي هُوَ عَدُوٌّ لَهُمَا قَالَ
يَمْوَسَىٰ أَتَرِيدُنِي أَفَنُقَاتِلُكَ فَتَسَاءَلُ يَا أَلْمَسِيَّةَ
إِنْ تُرِيدُ إِلَّا الْآنَ تَكُونُ جَبَّارًا فِي الْأَرْضِ وَمَا يُدْرِيكَ
تَكُونُ مِنَ الْمُضْلِحِينَ ﴿١٩﴾

20. Waxaana ka Yimid Magaalada Xageeda Fog Nin Ordi oo leh Muusow, Qoomku waxay ku Tashanayaan inay ku Dilaan ee Bax Anuguna waan kuu Naseexayne.

وَجَاءَ رَجُلٌ مِنْ أَقْصَا الْمَدْيَنَةِ يَسْعَىٰ قَالَ يَمْوَسَىٰ إِنَّ
الْمَلَائِكَةَ يَأْتِمُرُونَ بِكَ لِتُكْرِمَكَ فَأَخْرَجُنِي إِلَىٰ لَكَ مِنْ
التَّصْحِيحِ ﴿٢٠﴾

Aayaduhu waxay Inooga Warrami in Nabi Muuse markuu dilay Ninkay Colka ahaayeen uu ahaaday mid Cabsan oo wax Yeello ka Yaabi, wuxuuna Haddana Mar Labaad la Kulmay kuu Shalay u Hiiliyey oo Haddana mid kale la Diriri, markuu ku Sheegay Doqonimo oo doonay inuu Qabto kay Colka ahaayeen, wuxuu Faafiyey in Nabi Muuse Shalay Nin Dilay Maantana dooni inuu wax Dilo, Dhulkana Xumaan ku Faafiyo, Qoomkiina waxay ku tashadeen in la Dilo Nabi Muuse, waxaase u soo Digay Nin Naasix u ah. Al-Qaşaş (18-20).

21. Wuuna ka Baxay (Magaaladii) Isagoo Cabsan oo Filan (waxyeello) wuxuuna yidhi Eebow iga Kori Qoomka Daalimiinta ah.

فَخَرَجَ مِنْهَا خَائِفًا يَتَرَقَّبُ قَالَ رَبِّ نَجِّنِي مِنَ الْقَوْمِ
الظَّالِمِينَ ﴿٢١﴾

22. Markuu U jahaystay madyan Xageedana wuxuu yidhi wuxuu u Dhawyahay Eebahay inuu igu (Hanuuniyo) jidka Toosan.

وَلَمَّا تَوَجَّهَ تِلْقَاءَ مَدْيَنَ قَالَ عَسَىٰ رَبِّي أَنْ يَهْدِيَنِي
سَوَاءَ السَّبِيلِ ﴿٢٢﴾

23. Markuu Gaadhay Biyaha Madyana wuxuu ka Helay Ummad Dad ahoow Waraabinaysa wuxuuna ka helay Sokodooda Labo Haweena oo Reebi (Adhi-gooda) wuxuuna yidhi muxuu Xaalkiinu yahay, waxayna Dheheen Ma Waraabinno intay ka Fulaan Xoola jirku, Aabbahanana waa Oday Wayn.

وَلَمَّا وَرَدَ مَاءَ مَدْيَنَ وَجَدَ عَلَيْهِ أُمَّةً مِنَ النَّاسِ
يَسْتَأْذِنُ وَوَجَدَ مِنْ دُونِهِمُ امْرَأَتَيْنِ تَذُودَانِ قَالَ
مَا خَطْبُكُمَا قَالَتَا لَا نَسْتَفِي حَتَّىٰ يُصَدِّرَ الرِّعَاةَ
وَأَبُو اسْتَفِيحٌ كَبِيرٌ ﴿٢٣﴾

24. Markaasuu u Waraabiyey wuxuuna u Jeedsaday Xagga Hooska wuxuuna

فَسَقَىٰ لَهُمَا ثُمَّ تَوَلَّىٰ إِلَى الظِّلِّ فَقَالَ رَبِّ إِنِّي لِمَا

Yidhi Eebow waxaad ii soo Dejiso
(Isiiso) oo Khayra waan u Baahnahay.

أَنْزَلَتْ إِلَيْنَا مِنْ خَيْرٍ فَقِيرٌ ﴿١٦﴾

markay ku Tashadeen Qoomkii inay Dilaan Nabi Muuse Yuu Baxay oo ka Tegay Masar Isagoo in la Haleelo ka Cabsan, oo Eebe Baryi inuu ka Koriyo Daalimiinta, wuxuuna Aaday Xagga Madyan Isagoo Eebe ka baryi ku Toosin Jidka Toosan, Markuu Gaadhay Biyahii Madyanna wuxuu la kulmay Dad Cabbi iyo Gabdho Celin Xoolahooda, markuu Warsadayna oy u Sheegeen in Aabbahood Yahay Oday Wayn, oyna Cabbin inta Dadku ka Cabbo, wuuse u Waraabiyey oo Hoos Fadhiistay isagoo Eebe Baryi, waana kaas Imtixaanku, waxayna la mid tahay Hijradii Nabiga Ammaan iyo Nabadgelyo Korkiisa Eebe ha yeelee Madiino ku aaday, waxayna ku Tusin Adkaysiga ku Sugnaanta Xaqa iyo Eebe ku Xidhaanta, iyo in Ilaahay u Gargaari Ciddii Xaqa u Gargaarta kuna Adkaata, Xaq oon muuqan oon Dadku ku Dhaqmaynna ma aha wax Habboon. Al-Qaşaş (21-24).

25. Markaasay u Timid Gabdhihii
Middood Iyadoo Xishoon waxayna ku
Tidhi Aabahay wuu kuu Yeedhi inuu
kaa Abaal Mariyo Ujuuradii Waraa-
bintaada Annaga, markuu u Yimid oos
Uga Warramay Qisadii yuu ku yidhi ha
Cabsan Waad ka Kortay Qoomkii
Daalimiinta ahaa.

فَإِنَّمَا نُهُ إِحْدَهُمَا تَمَشَى عَلَى أَسْتَحْيَاءَ قَالَتْ إِنَّ
أَبِي يَدْعُوكَ لِیَجْزِيَنَّكَ أَجْرًا مَا سَقَيْتَ لَنَا فَلَمَّا
جَاءَهُ وَوَقَّصَ عَلَيْهِ الْقِصَّصَ قَالَ لَا تَحْفَظْ حَبْرَتَ
مِنَ الْقَوْرِ الظَّالِمِينَ ﴿١٥﴾

26. Waxayna Tidhi Middiid Aabbow
noo Ijaar, Illeen waxaa u Khayr roon
Cid la Ijaarto Mid Xoog Badan oo
Aamin ah.

قَالَتْ إِحْدُهُمَا يَا أَبَتِ اسْتَجِرْهُ إِنِّي خَشِيتُ
مِنَ الْقَوْرِ الْأَمِينِ ﴿١٦﴾

27. Wuxuuna ku Yidhi Anugu waxaan
dooni inaan kuu Guuriyo Labadaydan
Gabdhood Middood inaan ku Ijaarto
Siddeed Sano Haddaad Dhammayso
Tobankana waa Adiga Agtaada, mana
Doonayo inaan ku Dhibo waxaana igu
Ogaan Hadduu Eebe Doono Kuwa
Wanaagsan.

قَالَ إِنِّي أُرِيدُ أَنْ نَمُنَّ بِكَ إِحْدَى ابْنَتَيَّ هَاتَيْنِ
عَلَى أَنْ تَأْجُرَنِي ثَمَنِي حَتَّىٰ إِنَّمَا أَمَمْتُ عَشْرًا
فَمِنْ عِنْدِكَ وَمَا أُرِيدُ أَنْ أَسْقُكَ عَلَيْهِ
سَتَجِدُنِي إِن شَاءَ اللَّهُ مِنَ الصَّالِحِينَ ﴿١٧﴾

28. Wuxuuna Yidhi Kassi waa Ballan
Dhexdeenna ah, Labada muddo Kaan
Dhammaystana Haygu xadgudbin (ood
wax Ka badan iga Dalabto), Eebana
waxaan Sheegayno waa u Wakiil.

قَالَ ذَلِكَ بَيْنِي وَبَيْنَكَ أَيَّمَا الْأَجْدَابِ فَضَيْتَ
فَلَا عُدْوَةَ عَلَيَّ وَاللَّهُ عَلَىٰ مَا نَقُولُ وَكِيلٌ ﴿١٨﴾

Markay Gabdhihii u Warrameen Aabbahood yuu Middood u soo Diray, waxayna ugu Timid Iyadoo Xishoon oon Hadalka Badinayn Isqaawinayna Bixid iyo Galid badanna ahayn siduu Sayid Cumar Yidhi, waxayna u Sheegtay inuu Aabbaheed u Yeedhi si uu Uga Abaal mariyo Waraabintisii, markuu u Yimidna oos uga Warramay Xaalkiisa wuu Xasiliyey oo u Sheegay inuu San ka Cabsan Daalimiinta

kana Nabad galay, Markay Gabdhaha middood u Ishaartay inuu u Ijaaro Iyadoo ku Sheegi Xoog iyo Aaminimo yuu u Guuriyey Middood kugulana ballamay inuu Siddeed Sano ama Toban Hadduu Doono U Ijaarraado, Saasayna ku Heshiyeen, waxayna Tusin Wanaagga Taakulaynta Dadka Tabarta yar iyo Eebe ku Xidhnaanta, Tan kale Xishood iyo Sharafata Wanaaggiisa, iyo inuu Xoogga iyo Aaminaadda lagu Doorto Cidda Shaqayn, Uguurinta Ninka Wanaagsan ee Sharafata iyo Diinta leh, Iyo Shaqada Xalaasha ah inay Sharafatay, Si kasta ha u Adkaatee.

Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Nabi Muuse wuxuu u Ijaaray Naftiisa Isdhawrid iyo Calooshiisa. Al-Qaşaş (25-28).

29. Markuu Dhammeeyey (Nabi) Muuse Muddadii oo la Tegay Ehelkiisii wuxuu ku Arkay Dhinaca Dhuur Dab, wuxuuna ku Yidhi Ehelkiisii Suga waxaan Arkaa Dabe waxaan u Dhawahay inaan Idiinka Keeno War ama Dhuxul Daba inaad Kulaashaan.

* فَلَمَّا فَصَىٰ مُوسَىٰ الْأَجَلَ وَسَارَ بِأَهْلِهِ آنَسَ
مِنْ جَانِبِ الطُّورِ نَارًا قَالَ لِأَهْلِهِ امْكُثُوا إِنِّي آنَسْتُ
نَارًا عَلَىٰ الْعَلِيِّ إِنِّي أَخَافُ أَن يُبَدِّلَ دِينَكُمْ أَوْ يُرْسِلَ
مِنْ أَتَارِكِكُمْ ۝٢٩

30. Markuu Yimidna waxaa Looga Dhawaaqay Togga Dhiniciisa Midig, Meeshii Barakaysnayd oo Geedka (Isagoo la Yidhi) Anugu Ilaahay Baan ahay Eebaha Caalamka ah.

فَلَمَّا أَنهَاهُنَّ رَأَىٰ مِنْ شِبْطِ الْوَادِ الْأَيْمَنِ فِي
الْبُقْعَةِ الْمُبَرَكََةِ مِنَ الشِّجَرِ أَن يُنمُوسَىٰ
إِنِّي أَنَا اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ ۝٣٠

31. Ee Tuur Ushaada Markuu Arkay iyadoo Gilgilanna ood Mooddo Mas wuu Jeedsaday Isagoo Carari, mana soo Jeedsan, (waxaana lagu Yidhi) Muusow soo Qaabil (soo Noqo), hana Cabsan Adugu Aaminbaad tahay (waad nabadgali).

وَأَنَّ إِلَىٰ عِصَاكَ فَلَمَّا رَأَتْهَا نَأَتْ جَانًا
وَلَأَتْ فُجْرًا وَإِلَىٰ عِصَاكَ يَمُوسَىٰ أَقْبَلَ وَلَا
تَخَفْ إِنَّا كُنَّا مِنَ الْأَمِينِينَ ۝٣١

32. Gali Gacantaada Jeebkaaga waxay soo Bixi Iyadoo Cad Xumaan (cudur) La'aan, Iskuna Dhaji Garabkaaga Argagaxa Dartiis taasina waa Xujooyin Eebe ka ahaatay oo Fircoon iyo Qoomkiisa (Loo diray) waana Qoom Faasiqiina.

أَسْلَمَكَ يَدَكَ فِي جَيْبِكَ فَخَرَجَ بِعَصَاكَ مِنْ غَيْرِ
سُوءٍ وَأَضْمَمْتَ إِلَيْكَ جَنَاحَكَ مِنَ الرَّهْبِ فَذَانِكَ
بُرْهَنَانِ مِنْ رَبِّكَ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَئِهِ إِنَّهُمْ
كَانُوا قَوْمًا فَاسِقِينَ ۝٣٢

Wuu Dhammaystay Nabi Muuse Muddadii wuxuuna la Tagay Ehelkii, wuxuuna Arkay Iftiin markuu Tagayna waa loo waxyooday, waxaana Muuqatay Calaamadii Usha iyo Gacanta, Cabsidiina waxay ku Rogmatay Fircoon iyo Colkiisii, Ileen Faasiqiin bay ahaayeen, saasayna Qisadu ku Socotaa inta laga Halaagi Fircoon iyo Colkiisa. Al-Qaşaş (29-32).

33. Wuxuu Yidhi Eebow waxaan ka Dilay Naf waxaana ka Cabsan inay I dilaan.

قَالَ رَبِّ إِنِّي قَتَلْتُ مِنْهُمْ نَفْسًا فَأَلْجَأُ
أَنْ يَقْتُلُونِ ۝٣٣

34. Walaalkay Haaruunbaana iga Fasiixsan Carrabka (Hadalka), ee Ila Dir Xoojin ha ii Rumeeyee, waxaan ka Cabsan inay I beeniyaan.

وَأَخِي هَارُونُ هُوَ أَفْضَلُ مِنِّي لِسَانًا فَأَرسلَهُ مَعِيَ
رِذَاءًا يَصِدِّقُنِي ۖ إِنَّهُ كَانَ يَكْفِيكَ ۝١٤

35. Wuxuu yidhi (Eebe) waannu ku Xoojin Cududdaada Walaalkaa waxaana idiin yeeli Xujo Idimana Gaadhayaan (Dhibkiinna) aayaadkanaga Dartood, Idinka iyo Inta idin Raacday yaana Adkaan.

قَالَ سَتَشِدُّ عَضُدَكَ بِأَخِيكَ وَيَجْعَلُ لَكَ مَا
سُلْطَنًا فَلَا يَصِلُونَ إِلَيْكَ مَا بَيَّأْتَنَا أَنْتَ وَمَنِ
اتَّبَعْنَا مَا الْقَالِيلُونَ ۝١٥

36. Markuu Ula Yimid muuse Aayaadkanaga oo Cad Cad waxay Dheheen kani waa Sixir la Abuurtay mana Aanaan ku maqal kan (oo kale) Aab-bayaalkannagii horreeyey.

فَلَمَّا جَاءَهُمْ مُوسَى بِآيَاتِنَا بَيِّنَاتٍ قَالُوا مَا هَذَا
إِلَّا أَسِحْرٌ مُّفْتَرَىٰ وَمَا سَعِينَا بِهَذَا ۖ فِتْنَاءَ آبَائِنَا
الْأَوَّلِينَ ۝١٦

37. Wuxuuna Yidhi Nabi Muuse Eebahaybaa og Cidda kala Timid Hanuun Agtiisa iyo Cidday u ahaan Cidhibta dambe Illeen ma Liibaano daalime.

وَقَالَ مُوسَىٰ رَبِّئِ أَنْعَلِمُ بِمَنْ جَاءَ بِالْهُدَىٰ مِنْ
عِنْدِهِ ۖ وَمَنْ تَكُونُ لَهُ عَاقِبَةُ الدَّارِ ۖ إِنَّهُ لَا يُفْلِحُ
الظَّالِمُونَ ۝١٧

Nabi Muuse wuxuu u Cawday Eebe isagoo Sheegi inuu naf ka Dilay, kana Yaabi inay Dilaan, Haaruunna ka Fasiixsanyahay oos Eebe ka Dalbi inuu ku Xoojiyo oo la Diro, Eebaa Ajjibay oo lala Diray Xujona Yeelay, uguna Bishaareeyey inay Dhibayn, oyna iyagu Adkaan, Gaalo Waa Caadadeede way Beeniyeen Xaqii waxayna ku Sheegeen Sixir, Eebaase og Cidda Hanuun la Timid iyo Tan Guulaysan, Gaalase ma Liibaanto, waxay Dheheen Dadkii hore Qaarkood: Cid Walaal uga wax tar badan Nabi Muuse ma jirto Eebuu Baryey inuu Haaruun Nabi laga Yeelo waana ka Aqbalay. Al-Qaşaş (33-37).

38. Wuxuu Yidhi Fircoon Madaxeeey Idiinma Ogi Eebe Iga soo Hadhay ee ii Huri Haamaanow Dhoobada iina Yeel Daar (dheer) inaan Daalacdo Ilaaha Muuse waxaan u Malayn inuu Beenaale yahaye.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ إِنِّي أَخْلَقْتُ لَكُمْ
مِنْ آلِهِ عَجْرَىٰ فَأَوْقِدْ لِيهَا نَارًا عَلَىٰ الصُّبْحِ
فَأَجْعَلَ لِي صَرَخًا لَعَلِّي أُعْطِجَ إِلَيْهِ ۖ إِنَّهُ
إِلَهُ مُوسَىٰ ۝١٨

39. Waxay Isku Kibriyeen isaga iyo Colkiisiiba Dhulka Xaq Darro waxayna u Maleeyeen inaan Xagganaga loo soo Celinayn.

وَأَسْتَكْبِرُوا بِهِ وَهُوَ خُجُوْدُهُ فِي الْأَرْضِ يَغْتَرِ بِهَلْجِ
وَعَطْوَاهُمْ ۖ إِنَّا لَنَرِيكَ جَمُوتًا ۝١٩

40. Waana Qabanay Isaga iyo Colkiisii waxaana ku Tuuray Badda ee Day Siday Noqotay Cidhibtii Daalimiinta.

فَأَخَذَتْهُ وَجُودُهُ وَرَفَعَتْهُمْ فِي السَّمَاءِ فَأَنْظَرُ كَيْفَ
كَانَ عَاقِبَةُ الظَّالِمِينَ ۝٢٠

41. waxaana ka Yeellay Madax ugu Yeedha Naarta, Maalinta Qiyaamana looma Gargaaro.

وَجَعَلْنَاهُمْ آيَةً يُدْعَوْنَ إِلَى الثَّارِ وَيَوْمَ
الْقِيَامَةِ لَا يُنصَرُونَ ﴿٤١﴾

42. Waxaana Raacinay Adduunyadan Lacnad, Maalinta Qiyaamana waxay noqon kuwa la dheereeyey (La halaa-gay).

وَاتَّبَعْنَاهُمْ فِي هَذِهِ الدُّنْيَا لَعْنَةً وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ
هُمْ مِنَ الْمَقْبُوحِينَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaan Siinay (Nabi) Muuse Ki-taabka ka Dib Intaan halaagnay Qu-ruumihii hore, Isagoo Aragti u ah Dadka iyo Hanuun Iyo Naxariis inay Xusuustaan Darteed.

وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ مِنْ بَعْدِ مَا
أَهْلَكْنَا الْقُرُونَ الْأُولَى بَصَائِرَ لِلنَّاسِ وَهُدًى
وَرَحْمَةً لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٤٣﴾

Fircoon Jaahilmadiisa iyo Isla waynidiisa wuxuu Sheegtay Ilaahnimo, isagoo Fari in loo Dhiso Guri wayn si uu ugu Khaldo inuu Eebe Daydayey soona waayey, dhabtii wuu is kibriyey, maxaase ka raacya isaga iyo Qoomkiisii, Muxuuse Ilaahnimo U Sheegan waayey markii la Maansheeyey ee uu Cabaadayey, waana la Nacladay Adduun iyo Aakhiraba lana Dulleeyay. Kitaabkii Tawreed ee Nabi Muuse la Siiyeyna wuxuu ahaa Waano, hanuun, iyo Naxariis haddii Dhabtiisii lagu Dhaqmo. Al-Qaṣaṣ (38-43).

44. Maadan ahayn Dhinaca Galbeed ee Buurta markaan Siinaynay Muuse Amarka «Nabinimada» mana aadan ahayn Kuwii Joogay.

وَمَا كُنْتَ بِجَانِبِ الْعَرَبِ إِذْ قَضَيْنَا إِلَىٰ مُوسَى الْأَمْرَ
وَمَا كُنْتَ مِنَ الشَّاهِدِينَ ﴿٤٤﴾

45. Laakiin waxaan ahaysiinay Quruumo waxaana ku dheeraaday Cimrigii, mana aadan ahayn mid ku naga Ehelkii Madyan Adoo ku Akhrin Kor-kooda Aayaadkanaga Laakiin anagaa ku Dirray.

وَلَكِنَّا أَنشَأْنَا قُرُونًا فَتَطَاوَلَ عَلَيْهِمُ الْعُمُرُ وَمَا
كُنْتَ ثَاوِيًّا فِي أَهْلِ مَدْيَنَ تَتْلُو عَلَيْهِمْ
آيَاتِنَا وَلَكِنَّا كُنَّا مُرْسِلِينَ ﴿٤٥﴾

46. Mana aadan ahayn Dhinicii (Buurta) Dhuur markaan u Dhawaaqay Laakiin waa naxariista Eebahaa Inaad u Digto qoom uusan u Imaan Dige kaa Horreeyey inay Waantoobaan.

وَمَا كُنْتَ بِجَانِبِ الطُّورِ إِذْ نَادَيْنَا وَلَكِن
رَحْمَةً مِن رَّبِّكَ لِتُنذِرَ قَوْمًا مَّا أَتَتْهُمْ مِنْ نَذِيرٍ
مِّن قَبْلِكَ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٤٦﴾

47. Haddayan jirin in markay ku Dhacdo Musiibo (Dhib) waxay hormarsadeen Gacmahoodu Darteed oo Markaas ay Dhahaan Ebow Maxaad noogu soo Diri wayday Rasuul oo

وَلَوْلَا أَن تُصِيبَهُمُ مُّصِيبَةٌ يَمَاقِدَمْتَ أَيُّدِيهِمْ
فَيَقُولُوا رَبَّنَا لَوْلَا أَرْسَلْتَ إِلَيْنَا رَسُولًا فَنَتَّبِعَ
آيَاتِكَ وَنَكُونَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

Raacno Aayaadkaaga Noqonnana Mu'iniinta «waa la Ciqaabi lahaa».

Aayado Badan Yuu Eebe ku Caddeeyey inuusan Nabigu Joogin markay wax ka Dhaceen Ummadihii hore, sida warkii Maryan, Halaagii Qoomkii Nabi Nuux, Nabi Yuusuf iyo Walaalihii iyo Nabi Muuse iyo Fircoon iyo Wixii la mid ah, ee Eebe wuxuu ku Ogaysiyey Waxyi, Nabiguna ma Joogin Dhuurkii Eebe Nabi Muuse kula Hadlay, iyo Madyan ee waxaa ka soo Wareegta Sanooyin iyo Qurumo, waxaase Eebe siiyey Nabiga Naxariis iyo waxyi si uu ugu Digo Qoom Jaahiliin ah oo Haddii la Cadaabana ku Calaacali maxaa Rasuul na loogu soo Dirj Waayey aan Raacno oon Rumeyno. Taasina waxay Muujin Xaqnimada Quraanka iyo inuu Yahay soo Dejin Eebaha wax walba og. Al-Qaşaş (44-47).

48. Markuu uga yimid Xaqii Xaggana-ga yey Dheheen maa la Siiyo wixii la Siiyey (Nabi) Muuse oo kale, miyeyna ka Gaaloobin wixii la Siiyey Muuse Horay, oyna Dihin waa Labo Sixir oo Iskaalmaystay waxayna dheheen Anna-gu Dhammaan waan ka Gaalownay.

فَلَمَّا جَاءَهُمُ الْحَقُّ مِنْ عِنْدِنَا قَالُوا لَوْلَا أُوَيُّو
مِثْلَ مَا أُوَيُّو مَوْسَىٰ أَوْلَىٰ يَكْفُرُوا بِمَا أُوَيُّو
مَوْسَىٰ مِنْ قَبْلِ قَالُوا سِحْرَانِ تَظَاهَرَا وَقَالُوا إِنَّا بِكُمْ
كُفْرُوتٍ ﴿٤٨﴾

49. Waxaad Dhahdaa ka Keena Kitaab Xagga Eebe ka Hanuun badan Laba-dooda aan raacnee haddaad Run Shee-gaysaan.

قُلْ قَالُوا يَكْفُرُ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ هُوَ أَهْدَىٰ مِنْهُمَا
أَتَّبِعُهُ إِن كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٤٩﴾

50. Haddayna ku Ajiibin (Maqlin) Ogow inay uun Raacayaan Hawadooda, wax ka Dhumid badanna ma jirto cid Raacday Hawadeeda Hanuun Eebe La'aantiis, Eebana ma Hanuuniyo Qoom Daalimiin ah.

فَإِنْ لَمْ يَسْتَجِيبُوا لَكَ فَاعْلَمْ أَنَّهُمَا كَانُوا
أَهْوَاءَهُمْ وَمَنْ أَضَلُّ مِمَّنِ اتَّبَعَ هَوَاهُ يَعْبُرُ هَدَىٰ
مِنَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴿٥٠﴾

51. Dhab ahaanbaan ugu Xidhiidhinay (ugu Caddayn) Hadalka inay Waantoo-baan.

* وَلَقَدْ وَصَّيْنَا لَهُمُ الْقَوْلَ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٥١﴾

Gaaladu War iyo Madax Adayg kama Daalaan, mar waxay ku Calaacali maa nalloo soo Diro Dige, markuu Nabigu (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Xaq ula Yimidna waxay Dheheen maa wixii Nabi Muuse la Siiyey oo kale la Siiyo, Dhabtuna waa inay ka Gaaloobeen wixii Nabi Muuse la Siiyey, oy kuna Sheegeen Isaga Iyo Quraanka Sixir Iskaalmaysan, waxaase lagu Aamusiiyey lagu Xujeeyey inay Keenaan Kitaab ka Fiican hadday Run Sheegi, haddii kalese waa Daalimiin Hawadooda Raacay xaq la'aan, wax badanna Eebe wuu u Caddeeyay Dadka Xaqa bal inay waano Qaataan. Cigrime Wuxuu yidhi: Labo Sixir waxay ula Jeedaan Tawreed Iyo Injiil. Al-Qaşaş (48-51).

52. Kuwaannu Siinay Kitaabka Hortiis way Rumayn isaga.

الَّذِينَ آتَيْنَاهُمُ الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِهِ هُمْ بِهِ
يُؤْمِنُونَ ﴿٥٢﴾

53. Marka lagu Akhriyo Korkoodana waxay Dhahaan waan Rumaynay Qu-raanku inuu Xaq Eebaheen ka Yimid yahay Annaguna waxaan ahayn hortiis Muslimiin.

وَإِذْ أَيْنَأْنَا عَلَيْهِمْ قَالُوا هَٰؤُلَاءِ أَمْثَالُ بَنِي آدَمَ إِنَّهُمُ لَأَخْوَانُ مِن رَّبِّنَا إِنَّا كُنَّا مِن قَبْلِهِمْ مُسْلِمِينَ ﴿٥٣﴾

54. Kuwaas waxaa la Siiyey Ajrigooda Labo mar Samirkoodii Dartiis, waxayna Raaciyaan Xumaanta Wanaag waxaan ku Arzuqayna waxbay ka Bixiyaan.

أُولَٰئِكَ نُؤْتُوهُمْ أَجْرَهُم مَّرَّتَيْنِ بِمَا صَبَرُوا وَيَدْرَءُونَ بِالْحَسَنَةِ السَّيِّئَةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٥٤﴾

55. Markay Maqlaan hadal Macno Darrana way ka Jeedsadaan waxayna Dhahaan Annagu Camalkanaga yaan leenahay idinna Camalkiinna Waad Salaamantihiin ma Rabno Jaahiliin (Waddadooda).

وَإِذَا سَمِعُوا اللَّغْوَ أَعْرَضُوا عَنْهُ وَقَالُوا إِنَّا تَعْمَلُنَا وَكُلُّكُمْ أَعْمَلُكُمْ سَأَلْنَاكُمْ لَاتَتَّبِعُوا الْجَاهِلِينَ ﴿٥٥﴾

56. Adugu ma Hanuunisid Ciddaad Jeceshahay laakiin Eebaa Hanuuniya Cidduu Doono Isagaana Og kuwa Hanuunsan.

إِنَّكَ لَا تَهْدِي مَنْ أَحْبَبْتَ وَلَٰكِنَّ اللَّهَ يَهْدِي مَنْ يَشَاءُ وَهُوَ أَعْلَمُ بِالْمُهْتَدِينَ ﴿٥٦﴾

57. Waxay Dheheen Gaaladii (Makaad) Haddaan Raacno Hanuunka waxaa Nalaga Dafi Dhulkannaga, Miyaanaan Siinin Xaram Aamina oo la Keeno Midhaha wax Kasta quudin Darteed oo Xagganaga ah, Laakiin Badankood ma Oga.

وَقَالُوا إِن نَّبَّعِ الْهُدَىٰ مَعَكَ نَنَحْطِفُ مِنْ أَنْصَابِنَا أَوْ لَوْ نُمَكِّنْ لَهُمْ حَرَمًا إِنَّمَا يَجْعِلُونَ إِلَٰهَهُمْ تُمْرَتًا كُلِّ شَيْءٍ زُرْقًا مِّن لَّدُنَّا وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٧﴾

Aayadahan waxay ku soo Degeen kuwii Rumeeyey oo Ehelu Kitaabka ahaa, inay Rumeeyeen Xaqa, Muslimna ahaayeen, Ajirkana loo laab laabi, Xumaanta iyo Warka Jaahiliintana ay ka Jeedsan jireen. Aayadaha kalana waxay ku soo Degeen Xaalkii Abuudaalib Nabiga Adeerkiis markuu Nabigu ka Quustay, in Eebe uun Hanuuniyo Cidduu Doono ee Cid kale wax Qabankarin, tan kalana waxay ka Warrami sida Eebe ugu Nicmeeyey Reer Makaad iyo Siday Xaqa u Diidi, Bukhaari iyo Muslim waxay Sheegeen in Markuu Sakaraadku Qabtay Abuudaalib Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku Yidhi:

Adeer Ashahaado aan Eebe Agtiisa kuugu Xujeystee Markaasuu Yidhi: Wuu Cabsaday lay Dhihi Maayo, Markaasuu Dhintay. Al-Qaşaş (52-57).

58. Badanaa intaan Halaagnay Magaalo ku Kibirtay Nolasheeda waana Taas Guryahoodii lamana Degin Gadaashood wax yar mooyee, Anagaana ah kuwo Dhaxla (Hadha).

وَكُرْهُمُ أَهْلُ كِنَانٍ قَرِيبَةٍ بَطَّرَتْ مَعِيشَتَهَا فِتَاكًا مَسَكَتُهُمْ لَمْ تُسَكِّنْ مِنْ بَعْدِهِمْ إِلَّا قَلِيلًا وَكُنَّا نَحْنُ الْوَارِثِينَ ﴿٥٨﴾

59. Mana aha Eebahaa mid Halaaga Magaalo intuu uga Bixiyo Tan Hooyada u ah «Caasimadda» Rasuul ku Akhriya Korkooda Aayaadkanaga mana nihin kuwo Halaaga Magaalo aan Ehelkeedu Daalimiin ahayn.

وَمَا كَانَتْ رَبُّكَ مُهْلِكًا الْفَرَسَىٰ حَتَّىٰ تَبْعَثَ فِيهَا
أُمَّهَاتَ سُؤْلًا يَسْأَلُوا عَنِّيهِمْ آيَاتِنَا وَمَا كُنَّا مُهْلِكِي
الْفَرَسَىٰ إِلَّا وَأَهْلَاهَا ظَالِمُونَ ﴿٥٩﴾

60. Wixii Laydin Siiyey oo Wax ah waa uun Raaxada Nolasha Dhaw iyo Quruxdeeda waxase Eebe Agtiisa ah yaa Khayr Roon oo Hadhid badan ee Miyeydaan wax Kasayn.

وَمَا أُولَئِكَ مِنْ شَيْءٍ فَمَتَّعَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا وَزَيَّنَّا
وَمَا عِنْدَ اللَّهِ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٦٠﴾

61. Ruuxaan u Yaboohnay Yabooh Fiican oo La Kulmi ma la Midbaa Ruuxaan ugu Raaxaynay Nolasha Dhaw markaas noqon Maalinta Qiyaame kuwa la Soo Joojin (La Cadaabi).

أَهْنُ وَعَدْنَاهُ وَعَدَّحَسَنًا فَهَوَىٰ لِقَبْرِ كَمَنْ مَتَّعْنَاهُ مَتَّعَ
الْحَيَاةِ الدُّنْيَا ثُمَّ هُوَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ مِنَ الْمُحْضَرِينَ ﴿٦١﴾

Wax badan yuu Eebe halaagay Magaalo ku Kibirtay Nolasheeda, markaas aan la Degin Guryahoodii iyaga kadib wax yar mooyee, Eebe umbaana u Hadhay, Lamana Halaago umad inta looga Diro Rasuul magaaladooda Weyn, Sidii Maka, kuna Akhriyo Quraanka, Halaaguna wuxuu ku Dhacaa Markay Dulmi Falaan.

Wax kasta oo Addunyo wax laysku Siiyana waa uun Nolol Dhaw oo Tagi, waxaase Khayr roon oo Hadhid badan Wanaagga Eebe Agtiisa ah, waana in wax la kasaa oo Lawaano Qaate. Mana sinna Ruux Wanaag loo Yaboohay oo la kulmi, iyo mid wax yar loo Raaxeeyey oo Noqon Qiyaamada kuwa loo soo Taago Ciqaabta. Ujeedaduna waa in Kibir iyo Isla waynida Macno Darro layska jiro, Raaxada Adduunna lagu Kadsoomin ee si Fiican iyo Sharaf iyo Eebe ka yaabid lagu Noolaado, Illeen Adduun iyo Aakhiri waxay isu yihiin Far Bad lagaliyey oo kale Siduu Nabigu Yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe karkiisa ha yeelee). Al-Qaşş (58-61).

62. Xusuuso Maalinta Eebe u Yeedhi Gaalada oo ku Dhihi Aaway kuwaad ila Wadaajiseen ah kuwaad Sheeganayseen (Caabudayseen).

وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ فَيَقُولُ أَيْنَ شُرَكَائِيَ الَّذِينَ كُنْتُمْ
تَزْعُمُونَ ﴿٦٢﴾

63. Kuwii waxay Dheheen uu ku Sugnaaday Hadalkii Eebe (Ciqaabtii) Eebow kuwaasu waa kuwaan Baadiyeynay, waana Baadiyeynay sidaan u Baadiyoownay waana isagakaa Bariyeelay mana ahayn kuwo Anaga Na caabuda.

قَالَ الَّذِينَ حَقَّ عَلَيْهِمُ الْقَوْلُ رَبَّنَا هَؤُلَاءِ الَّذِينَ
أَغْوَيْنَا أَغْوَيْنَاهُمْ كَمَا غَوَيْنَا تَبَرَّأْنَا إِلَيْكَ مَا
كَانُوا آتِنَا يَعْبُدُونَ ﴿٦٣﴾

64. Waxaana loo Odhan Uyeedha Shurukadiinna markaasay u Yeedhaan

وَقِيلَ ادْعُوا شُرَكَاءَكُمْ فَدَعَوْهُمُ فَلَمْ يَسْتَجِيبُوا لَهُمْ

mase Ajiibaan (Maqlaan) waxayna arkaan Cadaabka Markaasay Qoomamoodaan Hadday Hanuunilahaayeen.

وَرَأَوْا الْعَذَابَ لَوْ أَنَّهُمْ كَانُوا يَهْتَدُونَ ﴿٦٤﴾

65. Xusuuso Maalintaan u Yeedhayno Gaalada oos ku Odhan Eebe Maxaad ugu Jawaabteen Rasuulladii.

وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ فَيَقُولُ مَاذَا أَجَبْتُمُ الْمُرْسَلِينَ ﴿٦٥﴾

66. Markaasay ku Indho Beeshay kooda Xujadii (Waayeen Xujo) Maalintaas, waxna Isma Warsadaan.

فَعِيمَتِ عَلَيْهِمُ الْآيَاتُ يَوْمَئِذٍ فَهُمْ لَا يَتَسَاءَلُونَ ﴿٦٦﴾

67. Ruuxiise Toobadkeena oo Rumeeya oo Fala Camal Fiican wuxuu u Dhawyahay inuu Noqdo kuwa Liibaanay.

فَأَمَّا مَنْ تَابَ وَآمَنَ وَعَمِلَ صَالِحًا فَقَعَسَىٰ أَن يَكُونَ مِنَ الْمُفْلِحِينَ ﴿٦٧﴾

Maalinta Qiyaamana wuu soo kulmin Eebe Waydiinna waxay Caabudi Jireen, waxayna Qiran in Qaarkood Qaar Baadiyeeyey, wayna iska Fogayn inay Caabudi jireen, markay u Yimaaddaanna Ma Maqlaan, waxayna Qoomamoodaan Hanuun La'aantii. markii la Warsado waxay Rasuuladii ku Qaabileenna waxba way Sheegi waayi, waxna isma Warsadaan. Cidiise Toobadkeento oo Wanaag Fasha wuxuu u Dhawyahay in Loo Naxariisto. Al-Qaşaş (62-67).

68. Eebahaa wuxuu Abuuraa wuxuu Doono wuuna doortaa, Doorasho ma Leh Iyagu (Dadku) waa ka Nasahanyahay Eebe waana ka Sarreeyaa waxay la Wadaajin.

وَرَبُّكَ يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ وَيَخْتَارُ مَا كَانَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ سُبْحَانَ اللَّهِ وَتَعَالَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٦٨﴾

69. Eebahaana waa Ogyahay waxay qarin Laabtoodu iyo waxay Muujinba.

وَرَبُّكَ يَعْلَمُ مَا تُكِنُّ صُدُورُهُمْ وَمَا يُعْلِنُونَ ﴿٦٩﴾

70. Eebana waa Ilaaha isaga mooyee aan Ilaah kale xaq lugu caabudin, Mahad buu mutaa Adduun iyo Aakhiraba, Xukunkana isagaa iska leh Xaggiisaana loo Noqon.

وَهُوَ اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ لَهُ الْخُسُوفُ الْأُولَىٰ وَالْآخِرَةُ وَلَهُ الْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxaad Dhahdaa bal Warrama Hadduu ka Yeelo Eebe Korkiinna Habeen Joogta ah tan iyo Qiyaamada waa Kee Eebaha ka soo Hadhay Ilaahay ee idiin keeni Nuur miyaydaan wax Maqlayn.

قُلْ آرَأَيْتُمْ إِنْ جَعَلَ اللَّهُ عَلَيْكُمُ النَّارَ سَرْمَدًا إِلَىٰ يَوْمِ الْقِيَامَةِ مِنْ إِلَهٍ غَيْرِ اللَّهِ يَأْتِيكُم بِضِيَاءٍ أَفَلَا تَسْمَعُونَ ﴿٧١﴾

72. Waxaadna Dhahdaa bal Warrama Hadduu ka Yeelo Eebe Korkiinna Maalin Joogta ah tan iyo Qiyaamada

قُلْ آرَأَيْتُمْ إِنْ جَعَلَ اللَّهُ عَلَيْكُمُ النَّارَ سَرْمَدًا إِلَىٰ يَوْمِ الْقِيَامَةِ مِنْ إِلَهٍ غَيْرِ اللَّهِ يَأْتِيكُم بِلَيْلٍ

waa kee Eebaha ka soo Hadhay Ilaahay ee idiin keeni Habeen aad ku Xasishaan Dhexdiisa miyeydaan wax arkayn.

تَشْكُرُونَ فِيهِ أَفَلَا تُبْصِرُونَ ﴿٧٦﴾

73. Naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu idiin yeelay Hebeen iyo Dharaarba inaad Xasishaan dhexdiisa Dalabtaan-na Fadligiisa iyo inaad ku Shurgidaan.

وَمِنْ رَحْمَتِهِ جَعَلَ لَكُمْ آيَاتٍ وَالنَّهَارَ لِتَسْكُرُوا فِيهِ وَلِتَبْتَغُوا مِنْ فَضْلِهِ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٧٧﴾

Eebaa wax Abuura waxna Doorta, Dadse wax ma doortaan, Eebana Xumaan wuu ka Nasahan Yahay, Waxa la Qarin iyo waxa la Muujinna waa Ogyahay, Eebe Mooyee Ilaah xaq lugu caabudo ma jiro, Mahad iyo Xukunna isagaa iska leh Adduun iyo Aakhiraba. waana Eebaha Habeen iyo Maalin inoo Yeelay een midna Joogto ka Yeelin, Laakin Naxariis Darteed yuu Habeenka iyo Dharaarta inoogu yeelay si loo Xasilo loona Shaqeeyo waxaa wax mudan Mahad Eebe, iyo Cibaadadiisa. Al-Qaşaş (68-73).

74. Xusuuso Maalintaan u Yeedhayno Gaalada oo Eebe odhanaa Aaway Shurakadaydii ah kuwaad Sheeganayseen.

وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ فَيَقُولُ أَيْنَ شُرَكَائِيَ الَّذِينَ كُنْتُمْ تَزْعُمُونَ ﴿٧٨﴾

75. Waxaana ka soo Siibnaa ummad kasta Markhaati waxaana ku nidhi keena Xujadiinna waxayna Ogaadaan in Xaqa Eebe Leeyahay waxaana ka Dhumay Xagooda waxay Been Abuuran Jireen.

وَنَرَعْنَا مِنْ كُلِّ أُمَّةٍ سَهِيدًا اتَّقَلْنَا هَاهُنَا وَرُهْنَكُمْ فَعَلِمُوا أَنَّ الْحَقَّ لِلَّهِ وَصَلَّ عَنْهُمْ مَا كَانُوا يَفْعَرُونَ ﴿٧٩﴾

76. Qaaruuinna wuxuu ka mid ahaa qoomkii (Nabi) muuse, wuuna ku Kibray Korkooda, waxaana Siinay wax Furayaalkiisu ku Culustahay Koox Xoog badan, markay ku Dheheen qoomkiisii ha Farxin (Kibrin) Eebe ma Jecla kuwa Farxa «Kibree».

إِن قَرُونَ كَانَتْ مِنْ قَوْمِ مُوسَى فَبِعَنِي عَلَيْهِمْ وَإِن آتَيْتَهُ مِنْ كُنُوزٍ مَّا إِنَّ مَفَاحِقَهُ لَرْتَمُوهَا بِالْمَعْصِمَةِ أُولَى الْقُوَّةِ إِذْ قَالَ لَهُ قَوْمُهُ لَا تَفْرَحْ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْفَرِحِينَ ﴿٨٠﴾

77. Kuna doon waxa Eebe ku siiyey Guriga Aakhiro hana Halmaamin qaybtaada Adduunka Samana Fal sida Eebe kuugu Samo Falay hana La doonin Fasaad Dhulka, Eebe ma Jecla Fasaadiyaashee.

وَأَتَّبَعْتُمْ فِيمَا آتَاكَ اللَّهُ الدَّارَ الْآخِرَةَ وَلَا تَنْسَ صَيْدِيكَ مِنَ الدُّنْيَا وَأَحْسِنَ كَمَا أَحْسَنَ اللَّهُ إِلَيْكَ وَلَا تَبْتَغِ الْفَسَادَ فِي الْأَرْضِ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْمُفْسِدِينَ ﴿٨١﴾

Haddana Mar kalaa loo Dhawaaqi iyagoo la Warsan waxay Caabudi Jireen, Umad walbana waxaa laga soo Saari Marag oo Rasuul ah, waxaana la warsan inay keenaan Xujo waxayna Yaqiinsadeen in Xaqu Eebe u Sugnaaday, waxaana ka Dhumay Beentay Abuuran Jireen. qaaruuinna wuxuu ka mid ahaa

qoomkii Nabi Muuse wuuse ku Kibray, isago lahaa Xoolo Badan oo Furayaashiisu Culaysiso Koox Xoog Badan, waxayna Saaxiibadiis ugu Naseexeyeen inuusan Kibrin oon Faraxu ku Xambaarin Isla wayni, waxa Eebe Siiyeyna uu ku Doono Aakhiro, uusan Halmaaminna Nasiibkiisa Adduunka, wanaagna falo sida Eebe ugu Wanaag falay, Xumaan iyo Fasaadna uusan Dhulka la doonin, Illeen Eebe ma Jecla Xumaan wadayaasha iyo kuwa wax Fasaadiyee. Faraxana lama Diidana Hadduuna Fudayd iyo Xumaan kugu Xambaarayn ee waxaa uun la Rabaa Wanaag iyo Eebe ku Xidhnaan. Al-Qaşaş (74-77).

78. Wuxuuna Yidhi waxaa uun La ii siiyey Xoolaha Ogaanshahayga, Miyuusan ogayn in Eebe Halaagay Hortiis Quruumihii kuwo ka daran Xaggiisa Xoogga kana Badan Kulan, lamana Warsado Dambigooda Dambii-layaasha.

قَالَ إِنَّمَا أُوتِيْتُهُ عَلَىٰ عِلْمٍ عِنْدِي ۗ أَوَلَمْ يَعْلَم أَنَّ اللَّهَ
قَدْ أَهْلَكَ مِن قَبْلِهِ مِنَ الْقُرُونِ مَن هُوَ أَشَدُّ مِنْهُ
قُوَّةً وَأَكْبَرُ جَمْعًا ۗ وَلَا يُسْئَلُ عَن ذُنُوبِهِمُ
الْمُجْرِمُونَ ﴿٧٨﴾

79. Markaasuu u soo Baxay Qoomkiisii isagoo Xarragoon waxayna Dheheen kuwa Dooni Nolosha Dhaw Shallaytee Hadaan leenahay waxa la siiyey Qaar-ruun oo kale waa Nasiib wayn.

فَخَرَجَ عَلَىٰ قَوْمِهِ فِي زِينَتِهِ ۗ قَالَ الَّذِينَ يُرِيدُونَ
الْحَيٰوةَ الدُّنْيَا يَا لَيْتَ لَنَا مِثْلَ مَا أُوتِيَ قُورُونَ
إِنَّهُمْ لَدُوٌّ حَظِيظٌ ﴿٧٩﴾

80. Waxayna Dheheen kuwii la Siiyey Cilmiga Magaciinba'ee Abaal marinta Eebaa u Khayr roon Ciddii Rumaysa oo Fasha Camal fiican lamana Waafa-jiyo hadalkaas Saabiriinta Mooyee.

وَقَالَ الَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ وَيَلَعْنَ قُرْبَانَ اللَّهِ خَيْرٌ لِّمَن
ءَامَرَ وَعَمِلَ صَالِحًا ۗ وَلَا يُفْلِحُهَا إِلَّا
الصّٰدِقُونَ ﴿٨٠﴾

81. Markaasaan la Goynay Isagii iyo Xoolihiisiiba Dhulka mana Helin Koox uga Gargaarta Eebe ka Sokow, mana Noqonin mid Gargaarta.

فَخَسَفْنَا بِهٖ وَبِءَادَارِهَا الْأَرْضَ ۖ فَمَا كَانَ لَهُ مِن
فِتْنَةٍ يَبْصُرُوهٗ ۗ مِن دُونِ اللَّهِ وَمَا كَانَ مِنَ
الْمُنْتَصِرِينَ ﴿٨١﴾

82. Waxayna ahaadeen kuwii Doonayey Meeshiisa Shalay inay Dhahaan waa Yaabe Illeen Eebaa u Waasiciyey Rizqiga Cidduu Doono oo Addooma-diisa ah kuna Cidhiidhya, Hadduusan Eebe Nagu Galladaysan wuxuu nala Liibaanto Gaalo.

وَأَصْحَابُ الَّذِينَ كَفَرُوا مَكَانَهُ ۗ يَا لَأَمْسٍ يٰقُولُونَ
وَيَسْكَانُ اللَّهُ يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَن يَشَاءُ مِن عِبَادِهِ
وَيَقْدِرُ ۗ لَوْلَا أَن مَّنَّ اللَّهُ عَلَيْنَا لَخَسَفَ بِنَا وَيَسْكَانُ
لَا يُفْلِحُ الْكَافِرُونَ ﴿٨٢﴾

Muxuuse ku Jawaabay markii la Waaniyey, Wuxuu Sheegay in Xoolaha loo Siiyey Cilmigiisa iyo Wanaagiisa, Laakiin ha Ogaado in Eebe Halaagay hortiiis Qarniyo ka Xoog Badan kana Xoolo iyo Dad badan, Dambiihana lama Idan warsado, wuuse soo baxay Isagoo Xarragoon, markaasay Jeclaadeen kuwii Adduunka Doonayey inay isagoo kale Noqdaan, kuwiiis Cilmiga lahaa waxay Dheheen Magaciisba'ee Wanaagga Eebe yaa u Fiican Ciddii Sama Fasha, Dhulkaase lala Gooyey Qaarun iyo

Guryihiisiiba wax u gargaarana ma helin'isna isuma Gargaarin, markaasay kuwii Jeclaa wixiisoo kale Shalay Dheheen Yaab weeyee Illeen Rizqiga wuxuu ku Jiraa Awoodda Eebe'Waacin iyo Cidhiidhibta, waxayna Sheegeen in Haddaan Eebe u Naxariisan lala Goynlahaa dhulka, waxayna Ogaadeen Inayna Gaalo Liibaanayn.

Wana kaas Cidhibta Kibirka iyo Xoolaha sida Xun loogu Dhaqmo. Xooluhuse waa Wanaag Haddii Eebe laga yaabo oo lagu Samo Fallo. Al-Qaşaş (78-82).

83. Taasi waa Daartii Aakhiro wa xaana u Yeelay kuwaan Doonayn isla Sarraynta (Kibirka) Dhulka iyo Fasaad, cidhibta (Fiicanna) waxaa leh kuwa Dhawrsada.

تِلْكَ الدَّارُ الْآخِرَةُ نَجْعَلُهَا لِلَّذِينَ لَا يُرِيدُونَ عُلُوًّا فِي الْأَرْضِ وَلَا فَسَادًا وَالْعِزَّةَ لِلْمُتَّقِينَ ﴿٣٧﴾

84. Ciddii la Timaadda Wanaag wuxuu Mudan wax ka Khayr roon Ciddiise la Timaadda Xumaan lagama Abaal mariyo kuwa Xumaanta Sameeya, waxaan waxay faleen ahayn.

مَنْ جَاءَ بِالْحَسَنَةِ فَلَهُ خَيْرٌ مِنْهَا وَمَنْ جَاءَ بِالسَّيِّئَةِ فَلَا يُجْزَى الَّذِينَ عَمِلُوا السَّيِّئَاتِ إِلَّا مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٤١﴾

85. Eebaha kugu Faral yeelay Quraanka wuxuu kuu soo Celin Meeshii Ballanka (Qiyaamada ama Maka), waxaad Dhahdaa Eebahaybaa og ruuxii la Yimid Hanuun iyo kan ku Sugan Baadi Cad.

إِنَّ الَّذِي فَرَضَ عَلَيْكَ الْقُرْآنَ لَرَأْدُكَ إِلَى مَسَافِرِكَ فَارْتَدَّ مِنْ جَاءِ الْهَدْيِ وَمَنْ هُوَ فِي ضَلَالٍ مُبِينٍ ﴿٤٥﴾

86. Mana Aadan ahayn mid Rajayn in lagugu soo dejiyo Kitaabka, Hasayeeshe waa Naxariista Eebahaa ee ha Noqonin mid u Kaalmeeya Gaalada.

وَمَا كُنْتَ تَرْجُو أَنْ يُبَلِّغَنَّ إِلَيْكَ الْكِتَابَ إِلَّا رَحْمَةً مِنْ رَبِّكَ فَلَا تَكُونَنَّ ظَهِيرًا لِلْكَافِرِينَ ﴿٤٦﴾

87. Yeyna kaa leexin Aayaadka Eebe intii lagugu soo Dejiyey ka Dib uguna Yeedh Xagga Eebahaa, hana ka mid noqonin Mushrikiinta.


وَلَا يَصُدُّكَ عَنْ آيَاتِ اللَّهِ وَعَدَاؤُكَ إِذْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ وَالَّذِينَ أُولُوا الْأَرْحَامَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿٥٧﴾

88. Hana Caabudin Eebe la Jirkiisa Ilaah kale, Allaah mooyee Ilaah (Kalana) xaq luguma caabudo, wax kasta wuu halaagsami (tagi) Alle mooyee, Xukunkana, Isagaa iska leh, Xaggiisana laydiin Celin.

وَلَا تَدْعُ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ كُلُّ شَيْءٍ هَالِكٌ إِلَّا وَجْهَهُ لَهُ الْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٥٨﴾

Aayadadahanna waxay Sheegi in Daarta Aakhiro loo Yeelay kuwaan Iskibirin islana Waynayn, Xunaanna Dhulka Ku marin, Cidhibta Fiicanna waxaa Mudan kuwa Dhawrsada, Wanaagana Mid ja Fiican yaa lagu Abaal mariyaa, Xumaantana waxaa uun lagu Abaal Mariyaa waxay Fali Jireen. Eebana wuxuu Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) U Yaboohay Wanaag iyo

inuu meel Fiican u soo Celin ama Janada ha ahaato ama Moko ha ahaatee, Eebaana og Cidda Hanuunsan iyo Tan Baadida ah, Nabiguna ma Rajaynayn waxyi Intaan lagu soo Dejinin Quraanka. Gaalana wax loo Kaalmeeyo ma aha, iyo inay kaa leexiyaan Aayaadka Eebe inta lagugu soo Dejiyey, Gaalana wax laga mid Noqdo ma aha, Eebaana Xaq ah oo Xagiisa loo noqon, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayelee) wuxuu yidhi: Hadalka ugu Runsan ee Shaacir yidhi waa Hadalkii Labiid; wax kasta oo Ilaahay ka soo Hadhay way tagi. Suuradduna waxay soo Socoto oy marba hab u warantana waxay ku Dhamaatay: Inaan la Kibrin, Wanaagga la Falo, Eebe u soo Celin Nabiga Meel uu Jecelyahay, inaan Gaalo loo Kaalmayn, lana mid noqon, Eebe kaliyana la Caabudo, wixii ka soo hadhayna Tagi, xulumkuna isaga u ahaan, loona noqon isaga. Al-Qaşş (83-88).



Suurat Al-Cankabuut



Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. waxay ku tusin mucjisada Quraanka (sida la soo sheegay).

الْعَمَّ ①

2. ma wuxuu u maleeyey Dadku in loogaga tagi inay dhahaan waan ru-meynay oon la imtixaamayn.

أَحْسِبَ النَّاسَ أَنْ يُرَكَّبُوا أَنْ يَقُولُوا ءَامَنَّا وَهُمْ لَا يُفْتَنُونَ ②

3. dhab ahaan yaan u imtixaanay kuwii ka horreyay, Eebana wuu muujin kuwii run sheegay, wuxuuna muujin kuwa beenlowga ah.

وَلَقَدْ فَتَنَّا الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَلَيَعْلَمَنَّ اللَّهُ الَّذِينَ صَدَقُوا وَلَيَعْلَمَنَّ الْكَاذِبِينَ ③

4. mise waxay u maleeyeen kuwii xumaanta samaynayey inay naga dheereyn (carari) waxaa xun waxay xukumi.

أَمْ حَسِبَ الَّذِينَ يَعْمَلُونَ السَّيِّئَاتِ أَنْ يَسْفِهُنَا سَاءَ مَا يَحْكُمُونَ ④

5. ruuxii rajayn (ka cabsan) la kulanka Eebe, Ajashii Eebe (uu qadaray) way imaan, Eebana waa maqle oge ah.

مَنْ كَانَ يَرْجُوا لِقَاءَ اللَّهِ فَإِنْ أَجَلَ اللَّهُ لَكَ لَاحًا وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ⑤

6. ruuxii dadaala wuxuu uun u dadaalay naftiisa, Eebana waa ka kaaftoon yahay caalamka.

وَمَنْ جَاهَدَ فَإِنَّمَا يُجَاهِدُ لِنَفْسِهِ إِنَّ اللَّهَ لَغَنِيٌّ عَنِ الْعَالَمِينَ ⑥

7. kuwa (xaqa) rumeeyey camalficanna falay waxaan asturaynaa xumaantooda, waxaana ka abaalmarinaynaa kii u fiicnaa ay camalfali jireen.

وَالَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَنُكَفِّرَنَّ عَنْهُمْ سَيِّئَاتِهِمْ وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَحْسَنَ الَّذِي كَانُوا يَعْمَلُونَ ⑦

Adduunku waa guri imtixaan iyo shaqo, mana suurowdo in cidna lagu dhaafu inuu sheegto wanaag iyo xaqrumeyn imtixaan la'aan, taasina waa sunnada Eebe oo kuwii horaba wuu imtixaanay, wuuna muujin ciddii run sheegi iyo tii beensheegiba, cid ka fakanna majirto.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): Dadka waxaa ugu daran imtixaan Anbiyada, kuwa suubban iyo midba midkuu ka fiican yahay, ruuxana waa la imtixaaninta Diintu tahay hadday Diintu adag tahay imtixaamkaa lagu badiyaa. Waa saxiis.

wuxuu Eebe qadarana wuu imaan ee waa in wanaagga lagu dadaalo, ileen cid walba waxaa laga abaalmarin waxay latimaade xumaan iyo samaanba.

Xasan Albisri wuxuu yidhi: Ruuxu mujaahid buu noqon karaa isagoon maalinna Seef wax ku dhufanin. Al-Cankabuut (1-7).

8. waxaan u dardaaranay Dadka Labadiisii Waalid wanaagfalkooda, hadday kugula dadalaan inaad ila wadaajiso waxaadan cilmi u lahayn (Gaalowdo) ha ku adeecin, xaggayga unbaa laydiin soo celin, waxaana idiinka warrami (abaaalna marin) waxaad camalfali jirteen.

وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ حُسْنًا وَإِنْ جَاهَدَاكَ لِتُشْرِكَ بِي مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ فَلَا تُطِعْهُمَا إِلَيَّ مَرْجِعُكُمْ فَأُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٨﴾

9. kuwiise (xaqa) rumeeyey camalfiican-na falay waxaan dhexgalinaynaa kuwa suuban (Janada).

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَنُدْخِلَنَّهُمْ فِي الصَّالِحِينَ ﴿٩﴾

10. Dadka waxaa ka mid ah ruux dhihi waxaan rumeynay Eebe, markii lagu dhibo Eebe dartiisna kayeela imtixaamka Dadka (dhibkooda) cadaabka Eebe oo kale, hadday timaado Guul xagga Eebe ka ahaatay waxay dhahaan anagu waan idin la jirnay, Eebe miyuusan ahayn kan og waxa laabta Dadka ku jira.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يَبُولُ آمَنًا بِاللَّهِ فَإِذَا أُوذِيَ فِي اللَّهِ جَعَلَ فِتْنَةً لِلنَّاسِ كَذَّابٌ إِلَهُ وَلَئِن جَاءَ نَصْرٌ مِن رَّبِّكَ لَيَقُولُنَّ إِنَّا كُنَّا مَعَكُمْ أَوْ لَيْسَ اللَّهُ بِأَعْلَمَ بِمَا فِي صُدُورِ الْعَالَمِينَ ﴿١٠﴾

11. dhab ahaan yuu u muujin Eebe kuwa xaqa rumeeyey, dhab ahaanna wuxuu u muujin kuwa munaafiqiinta ah.

وَلَيَعْلَمَنَّ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا وَلَيَعْلَمَنَّ الْمُنَافِقِينَ ﴿١١﴾

12. waxay ku dhaheen kuwii galoobay kuwii xaqa rumeeyey raaca waddadan-nada aan xambaaroo gafafkiinee, mana aha kuwo xambaari wax gafakooda ah, ee waa beenaalayaal.

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِلَّذِينَ آمَنُوا اتَّبِعُوا سَبِيلَنَا وَلْنَحْمِلْ خَطِيئَتَكُمْ وَمَاهُمْ بِمَحْمُولِينَ ﴿١٢﴾ مِنْ خَطِيئَتِهِمْ قِن شَيْءٌ إِنَّهُمْ لَكَذِبُونَ ﴿١٣﴾

13. waxayse dhab ahaan u xambaari culaysyaalkooda iyo culaysyo Culaysyadoodii la jira, waxaana dhab ahaan loo warsan maalinta Qiyaame waxay been abuuran jireen.

وَلَيَحْمِلُنَّ أَثْقَالَهُمْ وَأَثْقَالًا مَعَ أَثْقَالِهِمْ وَلَيَسْئَلُنَّ يَوْمَ الْقِيَامَةِ عَمَّا كَانُوا يَفْعَلُونَ ﴿١٣﴾

Waalidkaa isagaa sabab u ahaa jiritaankaaga Eebe ka sokow, wuuna kugu dhibtooday siduu kuu korin lahaa, abaalkiisuna waa wanaag iyo samo fal hadduusan Gaalimo ku farin oon lagu adeecayn illeen Eebaa loo noqone, ciddii wanaagfashana kuwa wanaagsan yuu janada lagali. Eebana wax ka qarsoona majiro wuuna ogyahay kuwa markii ladhibana Diinta ka taga/markii guul la helana ku soo dhawaada, wuxuuna ogyahay Mu'minka dhabta ah iyo Munaafaqaba. Cid cid kale Dambi ka xambaarina majirto ee wuxuu xambaari ruux walba dambigiisii iyo kii dhumintiisa. Waxaa sugnaaday ruuxii hanuun uguyeedha wuxuu mudan ajriga kuwa uu u yeedhay oo kale ee raacay tan iyo qiyaamada isagoon iyana

waxba laga nusqaaminayn ajrigooda, ruuxii u yeedha baadina, waxaa korkiisa ah dambiga Kuwii ku raacay tan iyo Qiyaamada isagoon laga nusqaaminayn iyana dambigoodii waxba. Waa Saxiix. Al-Cankabuut (8-13).

14. dhab ahaan baan ugu dirray (Nabi) Nuux Qoomkiisii, wuxuuna ku dhexna-gaaday Kun sano oo kontan la' waxaa-na qabtay duufaankii (Halaagii Biyaha) iyagoo daalimiin ah.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ فَلَبِثَ فِيهِمْ آلْفَ سَنَةٍ إِلَّا خَمْسِينَ عَامًا فَأَخَذَهُمُ الطُّوفَانُ وَهُمْ ظَالِمُونَ ﴿١٤﴾

15. waana korinay Nuux iyo Dadkii Doonta, waxaana ka yeellay aayad (uu ku waantoomo) Caalamku.

فَأَنْجَيْنَاهُ وَأَصْحَابَ السَّفِينَةِ وَجَعَلْنَاهَا آيَةً لِلْعَالَمِينَ ﴿١٥﴾

16. (Nabi) Ibraahimna (waa diray) wuxuuna ku yidhi qoomkiisii Caabuda Eebe kana dhawrsada saasaa idiin khayrbadane haddaad wax ogtihiin.

وَأَيُّهُمْ إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَانْتَفِعُوا بِالَّذِي لَهُ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١٦﴾

17. waxaad uun caabudaysaan Eebe ka sokow Sanamyoo, waxaadna abuuraysaan been, kuwaad caabudaysaan Eebe ka sokow idiinma hantaan wax rizqi ah ee ka dalba Eebe agtiisa rizqiga, Caabudana kunna mahdiya xaggiisaa lay-diin celine.

إِنَّمَا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ أَوْثَانًا وَتَخْلُقُونَ إِفْكًا إِنَّ الَّذِينَ تَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ لَا يَمْلِكُونَ لَكُمْ رِزْقًا فَاتَّبِعُوا عِندَ اللَّهِ الزَّرْزُقَ وَاعْبُدُوهُ وَأَشْكُرُوا لَهُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿١٧﴾

18. haddaad Beenisaan (Xaqa) waxaa beeniyey Umado idinka horreeyey Ra-suulkana ma saarra waxaan gaadhsiiin cad ahayn.

وَإِن تَكْفُرُوا فَقَدْ كَذَّبْتُمْ مَن قَبْلِكُمْ وَمَا عَلَى الرَّسُولِ إِلَّا الْبَلْغُ الْمُبِينُ ﴿١٨﴾

Meelo badan yuu Eebe ku soo celceliyey qisada Nabiyada iyo Dadkii loo diray si loogu waano qaato, halkanna waxay aayaduhu caddayn in Nabi Nuux ku dhexnoolaa qoomkiisii muddadaas dheer xaqana ugu yeedhayey Beeniyeenna lana halaagay isaga iyo intii Doonta ku la jirtay mooyec.

Sidoo kale Nabi Ibraahim isna Eebaa u diray Qoomkiisii wuxuuna ugu yeedhay inay Eebe kaliya Caabudaan Rizqigana ka doonaan kuna mahdiyaan waxa isaga ka soo hadhayna ay iskaga tagaan, ciddii xaqa beenisana waxay la mid noqon kuwii horay xaqa u beeniyeey ee lalahaagay. Nabigana waxaa uun korkiisa ah caddaynta xaqa iyo ugu yeedhidiisa. Al-Cankabuut (14-18).

19. miyeyna arkayn sida Eebe u billaabay (Abuuridda) Khalqiga una soo celin, arrintaasna Eebe waa u fududahay.

أَوَلَمْ يَرَوْا كَيْفَ يُبْدِئُ اللَّهُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرٌ ﴿١٩﴾

20-waxaad dhahdaa socda Dhulka oo

قُلْ سِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَانظُرُوا كَيْفَ بَدَأَ الْخَلْقَ

daya sida Eebe u billaabay khalqiga, hadana Eebe u ahaysiin abuuridda dambe (Soo bixinta), Eebana wax wal-ba wuu karaa.

ثُمَّ اللَّهُ يُنشِئُ النَّسْأَةَ الْآخِرَةَ إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٠﴾

21. wuxuu cadaabaa cidduu doono wuxuuna u naxariistaa cidduu doono, xaggiisaana laydiin celin.

يُعَذِّبُ مَنْ يَشَاءُ وَيَرْحَمُ مَنْ يَشَاءُ وَإِلَيْهِ تُقْلَبُونَ ﴿١١﴾

22. idinkuna ma tihidin kuwa Eebe ku daaliya Dhulka iyo Samada midna wax Eebe ka soohadhay oo idiin sokeeya ah ama idiin gargaarina ma jiro.

وَمَا أَنْتُمْ بِمُعْجِزِينَ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي السَّمَاءِ وَمَا لَكُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿١٢﴾

23. kuwii ka gaaloobay aayaadka Eebe iyo la kulankiisa kuwaasi waxay ka quusteen naxariistayda waxaana ku-waas u sugnaaday Cadaab daran.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِ اللَّهِ وَلِقَائِهِ أُولَٰئِكَ يَكْفُرُونَ بِرَحْمَتِي وَأُولَٰئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٣﴾

24. Jawaabtii Qoomkiisuna waxaan ahayn Dila ama Guba ma ahayn, markaasaa Eebe ka koriyey Dabkii, arrintaasna waano yaa ugu sugan Cid-dii wax rumeyn.

فَمَا كَانَ جَوَابَ قَوْمِهِ إِلَّا أَنْ قَالُوا اقْتُلُوهُ أَوْ حَرِّقُوهُ فَأَنجَاهُ اللَّهُ مِنَ النَّارِ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿١٤﴾

25. wuxuuna ku yidhi (Nabi Ibraahim) waxaad yeelateen Eebe ka sokow Sana-myaal Jacayl dhexdiinna ah dartiis Nalosha adduunyo, Maalinta Qiyaa-mese wuu diidi qaarkiin qaarka kale Lacanadina qaarkiin qaarka kale, Hoy-giinuna waa Naarta wax idiin gargaari-na idiin ma sugnaan.

وَقَالَ إِنَّمَا اتَّخَذْتُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ أَوْثَانًا مَوَدَّةَ بَيْنِكُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا ثُمَّ يَوْمَ الْقِيَامَةِ يَكْفُرُ بَعْضُكُم بِبَعْضٍ وَتَأْتِنُ بَعْضُكُم بَعْضًا وَمَأْوَاكُمُ النَّارُ وَمَا لَكُمْ مِنْ نَّاصِرِينَ ﴿١٥﴾

Ruuxii Caqli leh waa inuu fikiraa sida Eebe wax u abuuray iyo siduu u karo inuu u soo celiyo una fududahay, Dhulkana waa in lamaraa si loo arko abuurka Eebe iyo qudradiisa. Caabudid, Naxariis, Gargaar iyo Awooddana Eebaa iska leh, ee waa in la rumeeyaa aayaadkiisa iyo lakulankiisa si loo helo naxariistiisa, Cadaabkiisana looga koro. Bal day Nabi Ibraahim siday ugu jawaabeen qoomkiisii oy dheheen dila Dabna ay ku tuureen markuu ugu yeedhay Cibaadada Eebe iyo inay katagaan Sanamyada ay isku jecelyihiin nolosha adduunyo, hadhow Qiyaamadase ay kala carari qaarna qaar Nacladi wax u gargaarina ayna helayn. Waana taas sida dhabta ah oo ah in inta xumaanta isku jeclaata nolosha adduunyo is nici doonaan Maalinta Qiyaame. Al-Cankaboot (19-25).

26. waxaa rumeeyey Nabi Ibraahim (Nabi) Luud wuxuuna yidhi Nabi Ibraahim waxaan u hijroon Eebahay illeen waa adkaade falsane.

﴿فَتَأْتِيهِمْ لَهُ لُوطٌ وَقَالَ إِنِّي مُهَاجِرٌ إِلَىٰ رَبِّي إِنَّهُ هُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١٦﴾﴾

27. waxaana siinay isxaaq iyo yacquub waxaana yeelay faraciisii Nabinimo iyo Kitaab (loo soodajiyey) waxaana siiney ajriigiisii adduunyada dhexdeeda aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa suuban.

وَوَهَبْنَا لَهُ إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ وَجَعَلْنَا فِي
ذُرِّيَّتِهِ الْأُمُومَةَ وَالْكَتَبَ وَأَتَيْنَاهُ أُجْرَهُ فِي
الدُّنْيَا وَإِنَّهُ فِي الْآخِرَةِ لَمِنَ الصَّالِحِينَ ﴿٢٧﴾

28. «Nabi» Luudna «xusuuso» markuu ku yidhi qoomkiisii waxaad latimaadeen xumaan aan cidna idiinkahormarin adduunyada.

وَأُولَئِكَ إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ إِنِّي عَلَىٰ
الْفَنَاءِ مَا سَبَقْتُكُمْ بِهَا مِنْ أَحَدٍ مِنَ
الْعَالَمِينَ ﴿٢٨﴾

29. idinku ma waxaad u tagayasaan Ragga ood goynaysaan Jidka Kulana imaanaysaan Naadigiina wax la naco, mana noqonin qoomkiisii jawaabtoodii inay dhahaan noo keen cadaabka Eebe hadaad ka Mid tahay runlayaasha mooyee.

إِنِّي عَلَىٰ لِقَائِكُمْ فِي النَّجْدِ
وَتَأْتُونَ فِي نَادِيكُمْ الْمُنْكَرُ فَمَا كَانَ جَوَابَ
قَوْمِهِ إِلَّا أَنْ قَالُوا أَنْتِنَا بِعَذَابِ اللَّهِ
كُنْتُمْ مِنَ الصَّادِقِينَ ﴿٢٩﴾

30. wuxuuna yidhi Eebow iiga gargaar qoomka wax fasaadiya.

قَالَ رَبِّ انصُرني عَلَى الْقَوْمِ الْمَفْسِدِينَ ﴿٣٠﴾

31. markay ulatimid fariintanadii (Maa'igtii) Nabi Ibraahim bishaaro waxay dhaheen anagu waxaan halaagaynaa ehelka magaaladan, ehelkeedu waa daalimiine.

وَلَمَّا جَاءَتْ رُسُلُنَا إِبْرَاهِيمَ بِالْبُشْرَىٰ قَالُوا إِنَّا
مُهْلِكُوا أَهْلَ هَذِهِ الْقَرْيَةِ بَعْدَ آبَائِكُمْ فَكَرِهَ
ظَلِيمِينَ ﴿٣١﴾

32. (wuxuu yidhi Nabi Ibraahim) waxaa ku sugan Luud, waxay dhaheen anagaa og cidda dhexdeeda ah waanu korinaynaa Luud iyo ehelkiisa Haweenaydiisa mooyee oo noqon kuwa halaagga ku hadhi.

قَالَ إِن فِيهَا لِلَّذِينَ ظَلَمُوا عَذَابٌ
لَّئِيمٌ وَأَهْلَهُ إِلَّا أُمَّرَأَةً مَكَانَتْ مِنَ
الْعَادِينَ ﴿٣٢﴾

Qisada Nabi Luudh iyo Qoomkiisa wax badan bay ku soo noqnoqotay Quraanka. waxayna samayn jireen xumaan laga xishoodo iyo akhlaaq xun.

Tan kale waxay ku tusin aayaduhu Hijradii Nabi Ibraahim iyo sidii Eebe u barakeeyey Faraciisa iyo naxariis badnidiisii, iyo inaan Nafna naf kale Dambigeeda qaadayn sidii Haweenaydii Nabi Luudba. Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa hga yeelee): Waxay tuuri jireen Dadka Waddada mari kuna jees jeesi jireen wana kaas la noco ay la imaan jireen. Imaam Axmed iyo kuwa kaleba yaa wariyey. Al-Cankabuut (26-32).

33. markay Rasuuladanadii (Malaa'ig-tii) u timid Luud wuu ka tiiraanyooday wuuna la cidhiidhyamay waxayna ku dhaheen ha cabsan hana tiiraanyoon waanu ku korin adiga iyo ehelkaagabee Haweenaydaada mooyee oo noqon kuwa lahalaaagi.

وَلَمَّا أَنْ جَاءَتْ رُسُلُنَا لُوطًا سِيقًا بِهِمْ
وَصَافٍ بِهِمْ ذُرِّيَّتًا وَقَالُوا لَا تَحْزَنْ
إِنَّا مُنَجُّوكَ وَأَهْلَكَ إِلَّا أُمَّرَأَتَكَ كَانَتْ مِنَ
الْفٰكِرِينَ ﴿٣٣﴾

34. waxaanu ku soo dajin magaalada Dadkeeda Dhagaxyo (Naareed) oo Samada ka yimid faasiqnimadooda dar-teed.

إِنَّا مَنُورُونَ عَلَىٰ أَهْلِ هَذِهِ الْقَرْيَةِ رَحْمَةً مِنَ
السَّمَاءِ يَمَّا كَانُوا يَفْسُقُونَ ﴿٣٤﴾

35. waxaanu kaga tagnay magaaladaa calaamad u muuqata Qoomkii wax kasi.

وَلَقَدْ تَرَكْنَا مَثَلَهُمْ فِي بَيْتِ
لُقْمَانَ يُعَاقِبُونَ ﴿٣٥﴾

36. ree Madyanna (waxaanu u diray) Walaalkood (Nabi) Shucayb wuxuuna ku yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe, rajeeyana (ka yaaba) Maalintii dam-baysay hana la soconina dhulka fasaa-din.

وَالِى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا فَقَالَ يٰقَوْمِ
اعْبُدُوا اللَّهَ وَارْجُوا الْيَوْمَ الْآخِرَ وَلَا تَتَّبِعُوا
الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ ﴿٣٦﴾

37. markaasay beniyeen waxaana qab-tay Gariir (iyo Qaylo) waxayna noq-deen kuwo Lawyaha u dhaca.

فَكَذَّبُوهُ فَأَخَذْتُمُ الرِّجْمَ فَاصْبِرُوا فِي
دَارِهِمْ جَلِيمِينَ ﴿٣٧﴾

38. Caad iyo thamuudna (waa halaa-gnay), «halaagooduna» wuxuu idiinka muuqdaa Guryahodii, wuxuuna u qur-xiyey Shaydaan Camalkoodi, wuxuuna kaleexiyey Jidka waxayna ahaayeen kuwo wax arka (haday waantoobi).

وَعَادًا وَثَمُودًا وَقَدْ تَبَيَّرْنَا بِكُمْ مِنْ
مَّسَكِيْنِهِمْ وَرَبِّكَ لَهُمُ السَّيِّطُنَ
أَعْمَلْتُمْ قَسَدَهمْ عَنِ السَّبِيلِ وَكَانُوا
مُسْتَبْصِرِينَ ﴿٣٨﴾

Martidoo la sharifo waa dabecad fiican oo Islaanimo, sidoo kale iyana waxaa fiican isu bishaaraynta iyo Cabsida iyo Murugta oo dadka laga fududeeyo, markaas ka dib waxay aayaduhu ka warameen Qoomkii Nabi Luud, Shuceyb, iyo reer Caad iyo thamuud iyo waxay ku dambeeyeen iyo waxay la yimaadeen oo xumaan ah. Waxaana warkooda lagu faahfaahiyey meela kale, waxaase loobaahanyahy uun in laga dheeraado Jidkoodii xumaa wanaagana lagu dadaalo. Al-Cankabuut (33-38).

39. Qaarun, Fircoon iyo Haamaana (waa lahalaaagay), dhab ahaanna wuxuu ugula yimid (Nabi) Muuse xujooyin wayna isku kibriyen dhulka, mana aha

وَقُرُونًا وَفِرْعَوْنَ وَهَمَانَ وَلَقَدْ جَاءَهُمْ مُوسَى
بِالْبَيِّنَاتِ فَأَسْتَسْكِرُوا فِي الْأَرْضِ وَمَا
كَانُوا سٰقِيْنَ ﴿٣٩﴾

kuwo naga dheereyn (carari) kara.

40. dhammaantood waxaan u qabanay dambigooda, waxaa ka mid ah mid aan ku diray, Dabayl Dhagax wadata, waxaa ka mid ah miday qabatay Qaylo, waxaa ka mid ah midaan la goynay Dhulka, waxaa ja mid ah midaan maanshaynay, Eebana ma aha kii dulmiya hasayeeshee iyagaa naftooda dulmiyey.

فَكُلًّا أَخَذْنَا بِذُنُوبِهِمْ فَمِنْهُمْ مَنْ أَرْسَلْنَا عَلَيْهِ حَاصِبًا وَمِنْهُمْ مَنْ أَخَذَتْهُ الصَّيْحَةُ وَمِنْهُمْ مَنْ حَسَفْنَا بِهِ الْأَرْضَ وَمِنْهُمْ مَنْ أَغْرَقْنَا وَمَا كَانَ اللَّهُ لِيُظْلِمَهُمْ وَلَكِنْ كَانُوا أَنْفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٤٠﴾

41. kuwii yeeshay Eebe kasokow Awliyo (sokeeye u gargaara) waxay lamid yihiin Caaro yeelatay Guri waxaana ugu xun Guri Guri Caaro hadday wax ogyihiin.

مَثَلُ الَّذِينَ اتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ أَوْلِيَاءَ كَمَثَلِ الْعَنْكَبُوتِ اتَّخَذَتْ بِعَبَثٍ وَإِنَّ أَوْهَنَ الْبُيُوتِ لَبَيْتُ الْعَنْكَبُوتِ لَوْ كَانُوا يَعْلَمُونَ ﴿٤١﴾

42. Eebe waa ogyhay waxay baryayaan (Caabudayaan) oo isaga kasoo hadhay, Eebana waa adkaade falsan.

إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا يُدْعُونَ مِنْ دُونِهِ مِنْ شَيْءٍ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٤٢﴾

43. taasina waa tusaale aannu u yeelayno Dadkawax kasi oon ahayn kuwa wax yaqaanna ma jiro.

وَتِلْكَ الْأَمْثَلُ نَضْرِبُهَا لِلنَّاسِ وَمَا يَعْقِلُهَا إِلَّا الْعَالِمُونَ ﴿٤٣﴾

Eebe dulmilowga wuu sugaa markuuse qabto ma fakiyo siduu ku falay dulmiilaayashii xaqa iyo Nabiyaada beeniyeey islama weynaaday sidii Qaaruu, Fircoon, iyo Haamaan iyo Qoomkii Nabi Luud, Nabi Nuux iyo Nabi Saalix iyo wixii lamidah dhammaantood waanalahalaagay dambigooda dartiis' waxayna kutusin in xumaan cidhibteedtahay Halaag' Eebana Cidna ma dulmiyo iyagaase is dumiya Dadku. Ruuxiise waxaan Eebe ahayn Caabuda wuxuu la mid yahay Caaro Guri dhoob dhoobtay oon waxba u tarayn, Eebaase ah wax laacaabudo awoodna leh waxaase arrintaas kasi kuwa Caqliga iyo Cilmiga leh. Waxaa laga wariyey Camar Binu Murrata inuu yidhi: Markaan maro aayad Kitaabka Eebe ka midah oonan Garanayn way iwalbahaarisaa illeen Eebaa yidhi (ma kasaan kuwa Cilmiga leh mooyee). Waxaa wariyey Ibnu Abii Xaatim. Al-Cankabuut (39-43).

44. Eebaa u abuuray Samooyinka iyo Dhulka si xaq ah, arrintaasna Calaa-maa ugu sugan Mu'miniinta.

خَلَقَ اللَّهُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٤﴾

45. Akhri (Nabiyow) waxa luguu waxayoon oo Kitaabka ah oog Salaaddana maxaayeelay Salaaddu waxayka reeb-taa (Dadka) Xumaanta iyo waxa la noco, xusidda Eebaana weyn, Eebana waa ogyahay waxaad sanceyneysaan.

أَنْتَ لِمَا أُوحِيَ إِلَيْكَ مِنَ الْكِتَابِ وَأَقِمِ الصَّلَاةَ إِنَّ الصَّلَاةَ تَنْهَى عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ وَلَذِكْرُ اللَّهِ أَكْبَرُ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا تَصْنَعُونَ ﴿٤٥﴾

46. hakula murmina ehelu Kitaabka wax fiican mooyee, marka lagareebo kuwa dulmiga fala oo ka mid ah, waxaadna dhahdaan waxaan rumeynay wixii nalagu soo dajiyey iyo wixii laydinku soo dajiyey Ilaahanno iyo ilaahiinna waa mid annaguna isagaan u hogaansanay.

* وَلَا تُجَادِلُوا أَهْلَ الْكِتَابِ إِلَّا بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ إِلَّا الَّذِينَ ظَلَمُوا مِنْهُمْ وَوَعَدُوا أُمَّمَنَا بِالَّذِي أَنْزَلْنَا إِلَيْهَا وَأَنْزَلَ إِلَيْنَا الْكِتَابَ وَالْهُمَا وَاللَّهُمَّ كَرِّمْ وَجْهَكَ وَتَحَنَّنْ لَهُ، مُسْلِمُونَ ﴿٤٦﴾

47. saasaanu kuugu soodajiney Kitaabka, kuwa la siiyey Kitaabkana way rumeeyaan, kuwaasna waxaa ka mid ah kuwo rumeyn (reer Makaad), mana diido aayaadkanaga Gaalmooyee.

وَكَذَلِكَ أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ فَالَّذِينَ آتَيْنَاهُمُ الْكِتَابَ يُؤْمِنُونَ بِهِ وَمِنْ هَؤُلَاءِ مَنْ يُؤْمِرُ بِهِ وَمَا يَجْحَدُ بِآيَاتِنَا إِلَّا الْكَافِرُونَ ﴿٤٧﴾

48. matihid mid wax akhriya Quraanka ka hor kumana aadan dhigi jirin Midigtaada markaas ay shakiyaan kuwa baadilka (xumaanta) ku socda.

وَمَا كُنْتُمْ تَشَاوِرُونَ قَبْلَهُ مِنْ كِتَابٍ وَلَا تَخُطُّهُ بِيَمِينِكُمْ إِذَا آتَاكُمُ الْمَطْلُوعَاتُ ﴿٤٨﴾

49. waase aayaad cad cad kuna sugan laabta kuwa cilmiga la siiyey, wax diidi aayaadkanaga oon daalimiinta ahayna ma jiro.

بَلْ هُوَ آيَاتٌ بَيِّنَاتٌ فِي صُدُورِ الَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ وَمَا يَجْحَدُ بِآيَاتِنَا إِلَّا الظَّالِمُونَ ﴿٤٩﴾

Cirka iyo dhulka waxaa ku sugan aayado wax lagu qaato, ruuxa Mu'minka ahna waxaa laga rabaa inuu akhriyo Quraanka Salaadana oogo'illeen waxa xunbay reebtaaye Xusidda Eebana u dadaalo. Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): ruuxayna Salaadiisu ka reebin xumaanta iyo waxa la naco Salaadu uma jirto. (Ibnu Abii Xaatim). Tan kale waa in si fiican Dadka Xaq loogu yeedho oon muran lahayn, hasa yeeshee ciddii madax adkaata waa in loola maro sida ku haboon'illeen Ilaaheen waa mid kaliya isagaana u hogaansanahaye, Quraankana isagaa soo dajiyey cid aan Gaal Ahayna madiido. Nabiguna wax ma akhriin jirin mana Qori jirin Quraanka ka hor, illeen way shakin lahaayeen xumaanlowguye. Al-Cankabuut (44-49).

50. waxay dhaheen gaaladii (Makaad) maxaa loogu dajinwaayey korkiisa aayado xagga Eebe ka yimid, waxaad dhahdaa aayaadku waxaa uun ay ka yimaadaan Eebe agtiisa aniguse waxaan uun ahay udige muuqda.

وَقَالُوا لَوْلَا أَنْزَلَ عَلَيْهِ آيَاتٌ مِنْ رَبِّهِ قُلْ إِنَّمَا الْآيَاتُ عِنْدَ اللَّهِ وَإِنَّمَا أَنَا نَذِيرٌ مُبِينٌ ﴿٥٠﴾

51. miyuusanse ku fileyn inaan kugu soo dajinay Kitaabka (Quraanka) oo lagu akhriyo korkaaga, arrintaasna naxariis iyo waano yaa ugu sugan qoomkii rumeyn (xaqa).

أَوَلَمْ يَكْفِهِمْ أَنَّا أَنْزَلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ يُنْقَلُ عَلَيْهِمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَرَحْمَةً وَذِكْرًا لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٥١﴾

52. waxaad dhahdaa waxaa ku filan dhexdeenna Eebe markhaati ahaan wuxuuna ogyahay waxa ku sugan samooyinka iyo Dhulka, kuwa rumeeyey baadil kana gaaloobay Eebe kuwaasi iyaga uunbaa khasaaray.

قُلْ كَفَىٰ بِاللَّهِ بَيْنِي وَبَيْنَكُمْ شَهِيدًا ۗ إِنِّي مُبْعَثٌ
مَّا فِي السَّمٰوٰتِ وَالْاَرْضِ ۗ وَالَّذِيْنَ ءَامَنُوْا بِالْبَطْلِ
وَكَفَرُوْا بِاللّٰهِ اَوْلِيَٰٓكَ هُمُ الْخٰسِرُوْنَ ﴿٥٢﴾

53. waxay kaa dadajisan Cadaab, had-daynajirin muddo magacaaban waxaa u imaan lahaa Cadaabka, wuxuuna ugu imaanlahaa kado iyagoon ogayn.

وَيَسْتَعِجِلُوْنَكَ بِالْعٰدَابِ ۗ وَلَوْلَا اَجَلٌ مُّسَمًّى لَّجَآءُ
الْعٰدَابِ ۗ وَاِيَّانِيْهِمْ بَعْتَهُ ۗ وَهُمْ لَا يُشْعُرُوْنَ ﴿٥٣﴾

54. waxay kaa dadajisan Cadaab, Naarta Jahannamana waxay koobi gaalada.

يَسْتَعِجِلُوْنَكَ بِالْعٰدَابِ ۗ وَاِنْ جَهَنَّمَ لَمُحِيْطَةٌ
بِالْكَافِرِيْنَ ﴿٥٤﴾

55. maalinta (Qiyaamada) waxaa da-booli Gaalada Cadaab korkooda iyo Lugahooda hoostoodaba, wuxuuna ku dhihi Eebe dhadhamiya waxaad Camalfali jirteen.

يَوْمَ يَبْعَثُهُمُ الْعٰدَابُ مِنْ فَوْقِهِمْ ۗ وَمِنْ تَحْتِ
اَرْضِهِمْ وَيَقُوْلُ دُوْرًا مَّا كُنْتُمْ تَعْمَلُوْنَ ﴿٥٥﴾

Gaaladii ree Makaad aadbay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelec) u dhibeen uguna madax adkaadeen, waxayna warsadeen Mucjisooyin Gaar ah oo say rabaan ah, waxaase ku filan ruuxii xaqa raba Quraanka naxariista iyo hanuunka ah, marag iyo gargaarana Eebaa ku filan, kuwa khasaarayse waa kuwa rumeeyey xumaan xaqana beeniycy, Cadaabna wax la dadajisto ma aha'illeen wax walba mudduu lecyahaye, waxaase imaan Maalin Cadaabku dhan walba gaalada ka koobi si xunna ay u dulloobi. Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo nadgalyo Eebe korkiisa ha yeelec): Nabi kasta waxaa la siiyey wax isagoo kale dadku ku rumeeyeen waxaase laysiiyey waxyi Eebe ii waxyooday, waxaana rajayn inaan ahaado midka kuwa raacay ugu badanyihiin. Al-Cankabuut (50-55).

56. addoomadayda rumeeyow Dhulkaygu waa waasac ee Aniga uun i caabuda.

يَعْبَادِي الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا اِنْ اَرْضِيْ وَاِسْعَةٌ فَاِنْسِي
فَاَعْبُدُوْنِ ﴿٥٦﴾

57. Nafkastaa waxay dhadhamin Geerida xaggaygaana laydiin soo celin markaas.

كُلُّ نَفْسٍ ذٰٓئِقَةُ الْمَوْتِ ۗ ثُمَّ اِلَيْنَا تُرْجَعُوْنَ ﴿٥٧﴾

58. kuwa (xaqa) rumeeyey Camalfiican-na falay waxaanu ka dajin Jannada Qolol ay durceeri dhexdeeda wabiyaal ayna ku waari dhexdeeda, waxaana ugu wanaagsan ujuurada kuwa shaqeyey (Jannada).

وَالَّذِيْنَ ءَامَنُوْا وَعَمِلُوا الصّٰلِحٰتِ لَنَسُوْنَهُمْ مِنْ الْحَيٰٓةِ
عُرْفًا نَّجْرِيْ مِنْ تَحْتِهَا اَلْاَنْهٰرُ خٰلِدِيْنَ فِيْهَا ۗ نِعْمَ اَجْرُ
الْعٰمِلِيْنَ ﴿٥٨﴾

59. Ee ah kuwa samray Eebahoodna tala saarta.

الَّذِيْنَ صَبَرُوْا وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُوْنَ ﴿٥٩﴾

60. badanaa dhul socod aan xambaaran karin rizqigeeda ee Eebe arzuqo iyada iyo idinkaba. Eebana waa maqle oge ah.

وَكَيْفَ آتَيْنَ مِنَ دَابَّةٍ لَّا تَحْمِلُ رِزْقَهَا ۗ اللَّهُ يَرِزُقُهَا
وَإِيَّاكَ ۗ وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٦٠﴾

61. haddaad waydiiso Gaalada yaa abuuray samooyinka iyo dhulka oo sakhiray Qoraxda iyo Dayaxa, waxay odhan Ilaahay, ee xagee loo iili Gaalada.

وَلَيْن سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَسَخَّرَ
السَّمْسَ وَالْقَمَرَ لَيَقُولُنَّ اللَّهُ فَأَنَّى يُؤْفَكُونَ ﴿٦١﴾

62. Eebaa u waasiciya rizqiga ruuxuu doono oo addoomihiisa ah, kuna cidhiidhya (kuu doono), Eebana wax walba waa ogyahay.

اللَّهُ يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَن يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ وَيَقْدِرُ لَهُ
إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٦٢﴾

63. haddaad waydiiso Gaalada yaa ka soo dajiya Samada Biyo oo ku nooleeya dhulka intuu dhintay (abaaroorbay) kadib waxay odhan Ilaahay, waxaad dhahdaa mahad Eebaa iska leh, badan-kooduse wax ma kasayaan.

وَلَيْن سَأَلْتَهُمْ مَنْ نَزَّلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَحْيَا بِهِ
الْأَرْضَ مِنْ بَعْدِ مَوْتِهَا لَيَقُولُنَّ اللَّهُ قُلِ الْحَمْدُ لِلَّهِ بَلْ
أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٦٣﴾

Eebaheen wuxuu u sheegay addoomadiisa rumeeyey in dhulkiisu waasac yahay meel kastana ay ku caabudaan illeen naf walba way dhimane xagga Eebaana loo celine, kuwa xaqa rumeeyey oo Camal fiican falay waxaa ladajin janno ay ku waaraan illeen dar Eebey u Samreen wayna tala saarteen.

Eebaana wax kasta quudiya oo maqla oo og. Rasuulkuna wuxuu yidhi: (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): Dhulku waa dhul Eebe, addoomuhuna waa addoomo Eebe ee meeshaad khayr ka heshaba ku nagow. Imaam Axmed.

Waxayna ku tusin in Dhulka Muslimiintu Dhulkaliya yahay xaqna kuwada leeyihiin Gaaladiina haddii la warsado Eebaha Cirka, Dhulka, Qoraxda, Dayaxa oo Cirka Biya ka keena waxna arzuqa waxay qiri inuu Eebe yahay, gardarrayse u dhumeen dhabtuna waa in cid kasta rumeysantahay awoodka Eebe ee waxay u beenin xaqana uga leexan dangaar ahaaneed iyo yaan lagu xissaabin. Al-Cankabuut (56-63).

64. mana aha noloshan adduunyo Ciyaar iyo dheeldheel mooyee, Daarta aakhiraana meel nololeed ah hadday wax ogyihiin Dadku.

وَمَا هَذِهِ الْحَيَاةُ الدُّنْيَا إِلَّا لَهُمُوعْبٌ وَأَنَّ الدَّارَ
الْآخِرَةَ لَهيَّ الْحَيَاةُ ۗ لَوْ كَانُوا يَعْلَمُونَ ﴿٦٤﴾

65. markay koraan Doonta waxay baryaan Eebe iyagoo u kaliyeeli Cibaa-dada, markuu u koriyo (oo geeyo) Barrigana (Dhulkana) markaasay u shariigeelaan (wax la caabudaan).

فَإِذَا رَكِبُوا فِي الْفُلَاكِ دَعَاؤُ اللَّهِ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ
فَلَمَّا نَجَّهْتُمْ إِلَى الْبَرِّ إِذَا هُمْ يُشْرِكُونَ ﴿٦٥﴾

66. si ay uga gaaloobaan waxaan siinay uguna raaxaystaan, wayse ogaan doonaan (Cidhibteeda).

يَكْفُرُوا بِمَا آتَيْنَاهُمْ وَلِيَسْمَعُوا فَاَسْوَفَ
يَعَاشُونَ ﴿٦٦﴾

67. miyeyna arkeyn Gaaladii (Qureesheed) inaan yeeley (dajiney) Xaram aamin ah oo ladafayo Dadka dhinacya-dooda ah, mabaadilbay rumeyn oo nicmada Eebay ka gaaloobi.

أُولَئِكَ زُورًا أَنَا جَعَلْنَا حَرَمًا ءَامِنًا وَبِتَحَفُطِ
النَّاسِ مِنْ حَوْلِهِمْ أَفَبِالْبِطْلِ يُؤْمِنُونَ وَيَبْغِمُونَ
اللَّهُ يَكْفُرُونَ ﴿٦٧﴾

68. Cidna kama dulmi badna ruux ku been abuurtay Eebe korkiisa ama beeniyeey xaqa markuu u yimid, miyeyna ahayn Jahannamo Hoyga Gaalada.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ بِالْحَقِّ
لَمَّا جَاءَهُ ءَالِيسَ فِي جَهَنَّمَ مَثْوًى لِّلْكَافِرِينَ ﴿٦٨﴾

69. kuwa ku jahaaday Dartanno waxaanu ku hanuunin Jidkanaga, Eebana wuxuu la jiraa kuwa wanaagga fala.

وَالَّذِينَ جَاهَدُوا فِينَا لَنَهْدِيَنَّهُمْ سُبُلَنَا وَإِنَّ
اللَّهَ لَمَعَ الْمُحْسِنِينَ ﴿٦٩﴾

Nolosha adduunyo waa uun ciyaar oo kale raaxadeeduna waa uun muddo yar aakharaase nolaldhab ahi jirtaa waase inaan laysku halmaamin adduunka aakhirana lagajeedsanin, shaqada Xalaasha ahse waa waajib leyska abaalmarin.

Waxaa ka mid ah caadada dadka in markay dhib lakulmaan sida markay Badda ku safaan ama meelaha kalaba ay Eebe Isudulleeyaanmar kuu dhibkii ka saarana ay kuwo badan Gaaloobaan kana jeedsadaan.

Waxaa kale oo Eebe ku manaystay kuwii reer Makaad inuu dajiyey Xaram aamin ah oo Dadka gaararkooda ahna la waxyeleeyo, mase haboona iney xumaan rumeeyaan xaqana ka gaaloobaan. Cid ka dulmi badanna ma jirto ruux ku been abuurtay Eebe ama xaqa beeniyeey Jahannamana waa xerada Gaalada. Kuwase u jahaada dar Eebe wuu hanuunin Eebe una gargaari. taasina waxay ku tusin ahmiyada Jahaadka iyo sharaftiisa. Al-Cankbuut (64-69).



Suurat Ar-Ruum

سُورَةُ الرُّومِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. waxay ku tusin mucjisada Quraanka (sidii soo hormartay).

2. waxaa lagaga adkaaday Ruum.

3. Dhulkii dhawaa, intii laga adkaaday ka dibna way adkaan.

4. dhawr sano dhexdeed, amarkana Eebaa iska leh horey iyo diba, Maalin-taasayna ku farxi Mu'miniintu.

5. Gargaarka Eebe, wuxuuna u gargaari cidduu doono, waana adkaade naxariista ah.

6. waa yabooha Eebe, mana baajiyoo Eebe yaboohiisa, laakiin Dadka badan-kiisu ma oga.

7. waxay yaqaanaan Dadku muuqaalka nolosha adduunyo Aakhirose way halmaansanyihiin (ka jaahil yihiin).

8. miyeyna ka fikirin naftooda Inuusan Eebe Samaawaadka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya u abuurin waxaan xaq iyo muddo magacaaban ahayn, wax badan oo dadka ka mid ahna waxay ka Gaaloobi la kulanka Eebahood.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الْعَمَّ ①

عَلَيْتِ الرُّومِ ②

فِي أَدْنَى الْأَرْضِ وَهُمْ مِنْ بَعْدِ غَلَبِهِمْ

سَيَقْلِبُونَ ③

فِي رِصْقِ سِنِينَ لِلَّهِ الْأَمْرُ مِنْ قَبْلُ وَمِنْ بَعْدُ

وَيَوْمَئِذٍ يَقْرَأُ الْمُؤْمِنُونَ ④

يَنْصُرُ اللَّهُ يَنْصُرُ مَنْ يَشَاءُ وَهُوَ الْعَزِيزُ

الرَّحِيمُ ⑤

وَعَدَ اللَّهُ لَا يَخْلِفُ اللَّهُ وَعْدَهُ وَلَكِنْ أَكْثَرَ النَّاسِ

لَا يَعْلَمُونَ ⑥

يَعْلَمُونَ ظَهَرَ لِمَنْ الْحَيَاةُ الدُّنْيَا وَهُمْ عَنِ الْآخِرَةِ

هُمْ غَافِلُونَ ⑦

أُولَئِكَ يَنْفَكِرُونَ فِي أَنْفُسِهِمْ مَا خَلَقَ اللَّهُ السَّمَوَاتِ

وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا إِلَّا بِالْحَقِّ وَأَجَلٍ مُّسَمًّى

وَإِنَّ كَثِيرًا مِنَ النَّاسِ بِلِقَائِ رَبِّهِمْ

لَكٰفِرُونَ ⑧

Suuraddan waxay soo dagtay markay is laayeen ree Ruum oo ehelu Kitaab ahaa iyo reer Furus oo Majuusi (Diinlaawe) ahaa markaasna laga adkaaday reer ruum, kadibna Gaaladii farxeen oo dheheen waxaanu ka adkaam Muslimiinta, laakiin sida Eebe sheegay Ruumbaa adkaatay muddo yar ka dib, si Mu'miniintu ugu faraxdo gargaarka Eebe iyo cidduu wax u yabooho uusan ka baajineynin, Gaalase

waxay awoodoodii isugu geeyeen nolosha adduun Aakhirana way ka jeed sadeen, mana fikirin inaan Eebe ciyaar u abuurin Khalqigiisa.

Calaa Binu Subayr wuxuu ka wariyey Aabihiis inuu yidhi: Waxaan arkay Faarisoo Ruum ka adkaatay iyo Ruumoo Faaris ka adkaatay, ka dibna waxaan arkay Muslimiintoo ka adkaatay Faaris iyo Ruumba. dhammaanna waxay ahaayeen Dhawr iyo toban Sano Dhexdeed. Ibnu Kathiir.

Ar-Ruum (1-8).

9. miyeyna ku soconin Dhulka oy eegan siday ahaatay cidhibtii kuwii kahorreeyey (Gaaladii Makaad) waxay ahaayeen kuwo ka daran iyaga kana xoog badan, Dhulkana waybeerteen wayna Dhiseen Dhulka intay dhiseen wax ka badan. waxayna ula timid Rasuulladoodii Xujooyin, Eebana ma aha mid wax dulmiya, laakiin iyagaa naftooda dulmiyey.

10. markaasay noqotay cidhibtii kuwii xumaanat falay, xumaan iyo (Jahanna) mo beenintay aayadaha Eebe beeniyeen darteed, waxayna ahaayeen kuwo aayadaha ku jees jeesa.

11. Eebaa billaabay (Abuurka) Khalqi-ga isagaana soo celin, xaggiisaana laydiin celin.

12. Maalintay kici Saacaddu (Qiyaama-du) way aamusii dambilaayaashu (ooy quusan).

13. ugumana sugnaanin kuway Eebe lawadajiyeen (Cibaadada) Shafeeco waxayna noqon kuwo diida Shurakadookii.

14. Maalintay kici Saacadu waa maalin ay kala tagi Dadku.

15. Kuwa rumeeyey (xaqa) oo camalfii-canfalay Beer Janno yaa lagufaraxga-liyaa.

16. kuwa Gaaloobayse oo beeniyeey aayaadkanaga iyo lakulanka aakhiro kuwaas waxaa lagu kulmin Cadaabka.

أَوَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ
الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ كَانُوا أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَأَنَاءُوا
الْأَرْضَ وَعَمَرُوهَا أَكْثَرَ مِمَّا عَمَرُوهَا
وَجَاءَهُمْ رَسُولُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَمَا كَانُوا
يُظِلِّمُهُمْ وَلَكِنْ كَانُوا أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٩﴾

ثُمَّ كَانَتْ عَاقِبَةُ الَّذِينَ آسَفُوا أَن كَذَّبُوا
بِعَايَاتِ اللَّهِ وَكَانُوا بِهَا يَسْتَهْزِءُونَ ﴿١٠﴾

اللَّهُ يَبْدَأُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿١١﴾

وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ يُبْلِسُ الْمُجْرِمُونَ ﴿١٢﴾

وَلَوْ يَكُن لَّهُمْ مِنْ شُرَكَائِهِمْ شُفَعَاءُ وَكَانُوا
بِشُرَكَائِهِمْ كَافِرِينَ ﴿١٣﴾

وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ يُومِضُ بِتَقْرِفُوتٍ ﴿١٤﴾

فَأَمَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَهُمْ فِي
رَوْضَةٍ يُحْبَرُونَ ﴿١٥﴾

وَأَمَّا الَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَلِقَاءِ
الْآخِرَةِ فَأُولَئِكَ فِي الْعَذَابِ مُحْضَرُونَ ﴿١٦﴾

Aayadahan wuxuu Eebe ku hanuunin in Dadku dhulka ku socdaan si ay arkaan Qudrada Eebe iyo awoodiisa iyo inay arkaan raadkii ummadihii hore ee la abaalmaryey markay xaqii beeniyen iyo in ciddii xumaan fasha Cidhibteedu noqon in xumaan lagu abaalmaryo. Tan kale waxay Dadku noqon maalintaas qiyaame Laba kooxood, xaq raacayaal Janno gali' iyo xaq diidaayaal Naar u dheelman. Qataadana wuxuu yidhi: Wallee waa kala tag aan kulan ka dambayn. Ar-Ruum (9-16).

17. Eebaa nasahan (Ceeb ka fog) markaad galabaysanaysaan iyo markaad waabariisanaysaan.

فَسَبِّحْنَا اللَّهَ حِينَ تُمْسُونَ وَحِينَ تُصْبِحُونَ ﴿١٧﴾

18. mahadna isagaa ku leh Samooyinka iyo Dhulka dhexdooda iyo Habeenkii iyo Duhurkiiba.

وَالَهُ الْحَمْدُ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَعَشِيًّا وَحِينَ تُظْهِرُونَ ﴿١٨﴾

19. kana soobixiya wax nool wax dhintay wax dhintayna wax nool, nooleeyana Dhulka intuu dhintay ka dib, saasaana laydiin soo bixin.

يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ الْمَيِّتَ مِنَ الْحَيِّ وَيُحْيِي الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا وَكَذَلِكَ تُخْرَجُونَ ﴿١٩﴾

20. waxaana ka mid ah Callamooyinkiisa inuu idinka abuuray. Carro markaasaad noqoteen Dad dhaqdhaqaaqi (Faafi).

وَمِنَ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَكُمْ مِنْ تُرَابٍ ثُمَّ إِذَا أَنْتُمْ بَشَرٌ تَنْتَشِرُونَ ﴿٢٠﴾

21. waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray naftiina Haween si aad isugu xasishaan, yeelayna dhexdiina isjacayl iyo naxariis, taasina waxaa ugu sugan Calaamad qoomkii fikiri.

وَمِنَ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لِتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُمْ مَوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٢١﴾

aayadahan waxay inagu hanuunin inaan Eebe u tasbiixsano xumaantana ka nasahno wakhti walba'illeen isagaa awood leh oo wax walba abuuraye Dadkana soo bixin doonee, waxaana ka mid ah aayaadka Jiritaanka Eebe iyo Awoodiisa ku tusin inuu dadka Carro ka abuuray, Rag iyo Haweenka ka dhigay Si ay isuguursadaan oo isula nagaadaan iyaga oo naxariis iyo jacayl dhexyaalo. Rassulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe kirkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Eebe wuxuu ka abuuray Adam Dhulka oodhan wax ka mid ah, markaasuu noqday Bini aadamkii sida dhulka, waxaa ka midah midcad, mid Cas, mid Madow iyo mid u dhaxeeya, iyo mid xun iyo mid fiican iyo mid fudud, iyo mid adag iyo mid udhaxeeya. Waxaa wariye Axmed iyo kuwo kale. Ar-Ruum (17-21).

22. Waxaa ka mid ah Aayaadka ku tusin (Qudrada) Eebe samooyinka uu abuuray iyo Dhulka iyo kala duwanaanta Afkiina (Luuqada) iyo midabkiinaba, taasina calaamad yaa ugu sugan kuwa Cilmiga leh.

وَمِنَ آيَاتِهِ خَلْقَ السَّمَكَاتِ وَالْأَرْضِ وَأَخْتَلَفَ الْأَلْسِنَتِمْ وَالْوَلَوْنِمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِلْعَالِمِينَ ﴿٢٢﴾

23. waxaa ka mid ah Aayadka ku tusin (Qudrada) Eebe Hurdadiina Habeenkii iyo Maalintii iyo doonidiina Fadliga Eebe, taasna calaamad yaa ugu sugan kuwa wax maqli.

وَمِنَ آيَاتِهِ مَنَامُكُمْ بِاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ
وَأَنْتُمْ عَنْكُمْ مِنْ فَضْلِهِ إِنْ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ
لِّقَوْمٍ يَسْمَعُونَ ﴿٣٣﴾

24. waxaa ka mid ah Aayaadka ku tusin (qudrada) Eebe Hillaaca uu idin tusiyo, Cabsi iyo Doonid darteed, iyo Samada uu idiinka soo dajiyo Biyo, kuna nooleeyo Dhulka intuu dhintay ka dib, taasina Calaamado yaa ugu sugan kuwa wax kasi.

وَمِنَ آيَاتِهِ أَنْ يُرْسِلَ الْبَرْقَ حَوَافًا وَطَمَعًا وَيُرْسِلَ
مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَيُحْيِي بِهِ الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا
إِن فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٣٤﴾

25. waxaa ka mid ah Aayaadka ku tusin (qudrada) Eebe inay Samada iyo Dhulku ku taaganyihiin amarka Eebe, markuu Dhulka idiinka yeedhana (soobixinta) aa durba oo baxdaan.

وَمِنَ آيَاتِهِ أَنْ تَقُومَ السَّمَاءُ وَالْأَرْضُ بِأَمْرِهِ ثُمَّ إِذَا
دَعَاكُمْ دَعْوَةً مِّنَ الْأَرْضِ إِذَا أَنْتُمْ تَخْرُجُونَ ﴿٣٥﴾

Wali waxaay ka warrami aayaadku awoodda Eebe iyo siduu u abuuray Cirka iyo Dhulkaiyo siduu u kala duwa Hadalka oyo Midabka binii aadamka iyo siduu ugu sahlay hurdada si loogu nasto, ka dibna Khayrka Eebe loo dalbawaa xaalahaasna Calaamad yaa ugu sugan ciddii wax garan ama maqli, sidaas oo kale waa kan Eebe Dadka tusiyo Hillaaca Cirkana Roob ka keena Dhulkana ku nooleeya'amarkii-suuna Cirka iyo dhulka ku taaganyihiin, Dadkana ka soo bixin doona Dhulka Qiyaame darteed. Ar-Ruum (22-25).

26. Eebaa iska leh waxa Samooyinka iyo Dhulkaba ku sugan, isagayna u khushuucan (u hogaansamaan).

وَلَهُمْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ كُلِّ لَهٍ
قَلْبُونَ ﴿٣٦﴾

27. Eebe waa kan billaabay abuurka Khalqiga, hadana soo celin wayna u fududahay arrintaasu, Eebaana sifo sare ku muta Samooyinka iyo Dhulka, waana adkaad falsan.

وَهُوَ الَّذِي يَبْدَأُ الْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُ وَهُوَ أَهْوَنُ عَلَيْهِ
وَلَهُ الْمَثَلُ الْأَعْلَىٰ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ
وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٣٧﴾

28. Eebe wuxuu idiin yeeley tusaale naftiina ah, waxaad hanataan miyey idinlawadaagaan wax laydinku arzuqay, ood si isku mid ah u maamulaysaan, ugana cabsanaysaan siddaad isaga cabsataan, saasuuna u caddayn aayaadka ciddii wax kasi.

صَرَبَ لَكُمْ مَثَلًا مِّنْ أَنْفُسِكُمْ هَلْ لَكُمْ مِّنْ
مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ مِنْ شُرَكَاءَ فِي
مَا رَزَقْتَكُمْ فَأَنْتُمْ فِيهِ سَوَاءٌ تَخَافُونَهُمْ
كَخِيفَتِكُمْ أَنْفُسَكُمْ كَذَلِكَ نُفَصِّلُ
الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٣٨﴾

29. haseyeeshee waxay raaceen kuwii

بَلِ اتَّبَعَ الَّذِينَ ظَلَمُوا أَهْوَاءَ هُمْ بِغَيْرِ عِلْمٍ قَمَنَ

dulmilowga ahaa Hawadooda iyagoon wax ogayn, yaa hanuunin kara ruux Eebe dhumid u qadaray, wax u gargaarana lahayn.

يَهْدِي مَنْ أَضَلَّ اللَّهُ وَمَا لَهُمْ مِنْ نَاصِرِينَ ﴿٢٩﴾

Wax walba awooda Eebe yey ku jirtaa, ama cir ha ku noolaado ama Dhule, wax walbana Eebaa abuuray usoono celin si fudud, amaan iyo sharaf sarana Eebaa mudan, awood iyo Xigmaadna isagaa leh, wax maamulkiisa la wadaagana ma jiro, ruuxiise aqoon la'aan hawadiisa iska raaca oo dulmi fala yaa tusin oo u gargaari Eebe ka sokow. Abu Hureera waxaa laga wariyey in Rasuulku Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe wuxuu yidhi: Waxaa i beeniyeey ina Aadam umana haboona, wuuna i caayey umana haboona..... Ar-Ruum (26-29).

30. ee Wajigaaga u jeedi Diinta adoo toosan (Diintu) waa abuuridda Eebe ee Dadka uu ku abuuray, wax badali kara abuurka Eebena ma jiro, saasina waa Diinta toosan laakiin dadka badidiis ma oga.

فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا فِطْرَتَ اللَّهِ الَّتِي فَطَرَ النَّاسَ عَلَيْهَا لَا تَبْدِيلَ لِخَلْقِ اللَّهِ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيُّمُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٠﴾

31. idinkoo Eebe u noqon, kana yaaba, Salaadana ooga, Gaaladana ha ka mid noqonina.

* مُنِيبِينَ إِلَيْهِ وَاتَّقُوهُ وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَلَا تَكُونُوا مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿٣١﴾

32. ee Diintooda ku kala tagay noqdayna kooxo, Xisbi walba uu ku farxi waxa agtiisa ah.

مِنَ الَّذِينَ قُرُوءًا دِينَهُمْ وَكَانُوا شَيْعًا كُلِّ حِزْبٍ بِمَا لَدَيْهِمْ فَيَرْحُونَ ﴿٣٢﴾

33. hadduu Dadka taabto dhib waxay baryaan Eebahood iyagoo u noqon, markuuse dhadhansiiyo naxariis qayb iyaga ka mid ah waxay wax lawadaajiyaan Eebahood.

وَإِذَا مَسَّ النَّاسُ ضُرٌّ دَعَاؤُهُمْ مُنِيبِينَ إِلَيْهِ ثُمَّ إِذَا أَفْهَمَهُ مِنْهُ رَحْمَةً إِذَا فَرِيقٌ مِنْهُمْ بِرَيْبِهِمْ يُشْرِكُونَ ﴿٣٣﴾

34. si ay uga gaaloobaan waxaan siinney, iska raaxaysta, waadna ogaan-doontaan Cidhibta raaxadaasi.

لِيَكْفُرُوا بِمَا آتَيْنَاهُمْ فَتَسْمَعُوا لِمَنْ سَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٣٤﴾

35. mise waxaan ku soo dejeney xujo, oo ku hadli waxay Eebe la wadaajin.

أَمْ أَرَأَيْتُمْ عَلَيْهِمْ سُلْطَانًا فَهُوَ يَتَكَلَّمُ بِمَا كَانُوا بِهِ يُشْرِكُونَ ﴿٣٥﴾

Diinta Islaamku waa Diin xaq ah, waana Diin waafaqsan abuuridda Dadka iyo waxa wanaag ah ee ay dooni wax ka hor imaan karaana ama badali karaana ma jiro waxayna fari Eebe adeecid, sida Salaadda, Zakada iyo isku duubni iyo midnimo, iyo in Diintoo lagu kalatago ay gaalimo tahay, had iyo jeerna waa in Eebe la xusuusnaado, dhib iyo barwaaqaba si aan nicmadiisa looga gaaloobin xujo la'aan, ruuxii gaalimo ku raaxaystana wuxuu la kulmi Ciqaab xun. Ar-Ruum (30-35).

36. haddaan dhadhansiino dadka naxariis way ku farxi «kibraan» hadduu dhib ku dhacana waxay hor marsadeen darteed way quustaan.

وَإِذَا أَذَقْنَا النَّاسَ رَحْمَةً فَرِحُوا بِهَا وَإِن تُصِيبَهُمْ
سَيِّئَةٌ مَّا قَالُوا مَّا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ إِذْ هُمْ يَقْتُلُونَ ﴿٣٦﴾

37. miyeyna arkayn in Eebe u waasiciyo rizqiga cidduudoono, kuna cidhiidhyo (Cidduu doono) arrintaasna Calaa-mooyinbaa ugu sugan kuwa rumeyn (Xaqa).

أَوَلَمْ يَرَوْا أَنَّ اللَّهَ يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَن يَشَاءُ وَيَقْدِرُ
إِن فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٣٧﴾

38. ee Qaraabada sii xaqeeda iyo Miskiinka iyo Musaafurka, saasaa u khayroon kuwa dooni Wajiga Eebe, (u dhawaanshahiisa) kuwaasina waa kuwa liibaanay.

فَتَاتِ ذَا الْفُرْقَى حَقَّهُ وَالْمَسْكِينِ وَابْنَ السَّبِيلِ
ذَلِكَ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ يُرِيدُونَ وَجْهَ اللَّهِ وَأَوْلَىٰ بِكَ هُمُ
الْمُقْلِحُونَ ﴿٣٨﴾

39. waxaad bixisaan oo Ribo ah si aad uga badsataan xoolaha dadka ma badnaado Eebe agtiisa, wixiise aad bixisaan oo Zako (xalaal ah) idinkoo ku dooni wajiga Eebe kuwaas waa loo laablaabi.

وَمَا آتَيْتُم مِّن زَكَاةٍ يُرِيدُوا فِي أَمْوَالِ النَّاسِ فَلَا يَرِيدُوا
عِنْدَ اللَّهِ وَمَا آتَيْتُم مِّن زَكَاةٍ تُرِيدُونَ وَجْهَ
اللَّهِ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُضْمَعُونَ ﴿٣٩﴾

Sida mararbadan soo martay waa in Eebe had iyo jeer lagu xidhnaado lana xuso dhib iyo barwaaqaba, aan lana kibrin lana Quusan illeen saasi waa xigmad Eebe, Qaraabada, Masaakiinta, Musaafuriinta iyo Dadka Oomoon oodhanna Loogu samo falo'Eebe dartiis Si loo Liibaano, Ribada Damaca xoolaha Dadka iyo xoola jacaylka darana laysska jiro, lana sadaqaysto xoolo xalaal ah si Eebe agtiisa loogu Liibaano. Ar-Ruum (36-39).

40. Eebe waa kjan idin abuuray Hadana idin arzaaqay hadana idin Dili, hadana idin soo noolayn, majiraa shurakadiina mid fali sidaas wax kamid ah, Eebaa ka nasahana kana sareeya waxay la wadaajin.

اللَّهُ الَّذِي خَلَقَكُمْ فَرَزَقَكُمْ فَرَزَقَكُمْ ثُمَّ يُعْسِدُكُمْ فَيُرِيكُمْ
هَلْ مِّن شُرَكَائِكُمْ مَن يَفْعَلُ مِن ذَٰلِكُمْ مَن شَاءَ
سُبْحٰنَهُ وَتَعَالَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٤٠﴾

41. xumaanbaa ka daahirtay Barri iyo Badba, waxay kasbatay Gacmo Dad Dartiis, si Eebe u dhadhansiyo waxay camalfaleen qaarkiis, inay noqdaan.

ظَهَرَ الْفَسَادُ فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ مِمَّا كَسَبَتْ أَيْدِي
النَّاسِ يُدْرِكُهُم بَعْضُ الَّذِي عَمِلُوا لَعَلَّهُمْ
يَرْجِعُونَ ﴿٤١﴾

42. waxaad dhahdaa ku socda Dhulka fiiriyana siday noqotay cidhibtii kuwii hore, wuxuu ahaa badankoodu Mush-rikiin.

قُلْ سِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَانظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الَّذِينَ
مِن قَبْلُ كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُّشْرِكِينَ ﴿٤٢﴾

43. ee Wajigaaga Diinta toosani (Is-laamka) u jeedi, maalin aan la celin karin ka hor, Eebe xaggiisana ka iman, Maalintaas Dadku way kala tagi.

فَأْتِرْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ الْقَدِيمِ مِن قَبْلِ أَن يَأْتِيَ يَوْمٌ
لَّا مَرَدَّ لَهُ مِنَ اللَّهِ يَوْمَئِذٍ يُصَدَّقُونَ ﴿٤٣﴾

44. ruuxii Gaalooba isagay (dhibi) Gaalimadiisu, ruuxii camal wanaagsan fala Naftiisa yuu u goglay.

مَنْ كَفَرَ فَعَلَيْهِ كُفْرُهُ وَمَنْ عَمِلَ صَالِحًا فَلَا نَفْسُ لَهُ
يَمْهَدُونَ ﴿٤٤﴾

45. si Eebe u abaalmaryo kuwa ru-meeyey xaqa oo camal wanaagsan falay fadligiisa, Eebana ma jecla Gaalo.

لِيَجْزِيَ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ مِن فَضْلِهِ
إِنَّهُ لَا يَجُوبُ الْكَافِرِينَ ﴿٤٥﴾

Eebe isagaa wax abuuray, oo arzuqa, Dili, soona noolayn, Xumaanna waa ka fogyahay Dambiga iyo Macaasidu waxay sababaan xumaanta dhulka iyo fasaadkiisa dadkuna way dhadhamin xumaanta Gacmahoodu kasbadeen, waase in la fikiro dhulkana la maro, Diinta toosan ee Islaamka ee xaqa ahna lagu toosnaado, Qiyaame iyo xisaab iyo kalatagid ka hor, si xumaanlowgana xumaantiisa looga abaalmaryo, wanaaglowgana samihisa laga abaalmaryo'Eebana ma jecla Gaal iyo Xuma fale, wuxuuse jecelyahay Mu'miniinta xaqa raacda, Waxaa sugnaada in dadka, dhulka geedaha iyo Xooluhuba ka istareexaan Geerida kuwa xun xun. Ar-Ruum (40-45).

46. Calaamaadka Eebe ku tusin waxaa ka mid ah inuu dabaylaha diro iyagoo ku bishaarayn (Roob) iyo in Eebe idin dhadhansiyo naxariistiisa iyo in doontu ku socoto amarkiisa iyo inaad dalabtaan fadligiisa, markaas aad Eebe ku mahdisann.

وَمِن ءَايَاتِهِ أَن يُرْسِلَ الرِّيحَ مُبَشِّرَاتٍ لِّبَشِيرِكُمْ
رَحْمَتِهِ وَلِتَجْرِيَ الْفُلُوكُ بِأَمْرِهِ وَلِتَتَّعُوا مِن فَضْلِهِ
وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٤٦﴾

47. Waxaan dhab ahaan ugu diray hortaa Rasuulo qoomkoodii, waxayna ulayimaadeen xujooyin waana ka aar-sanay kuwii dambi Falay, waxaana korkanaga ah u gargaarka mu'miniinta.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ رُسُلًا إِلَى قَوْمِهِمْ فَجَاءَهُمْ
بِالْبَيِّنَاتِ فَأَتْتُمْتَمَنَّا مِنَ الَّذِينَ أَجْرَمُوا وَكَانَ حَقًّا
عَلَيْنَا نَصْرُ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

48. Eebe waa kan diray Dabaylaha oo markaas kicisa Daruuro kuna fidiya Samada, siduu doono kana yeela Goo-simo aad aragtid Roobka oo ka soobixi dhexdeeda, markaasuu Eebe Roobka siiyaa Ciduu doono oo adoomadiisa ka mid ahna markaasay bishaaraystaan.

اللَّهُ الَّذِي يُرْسِلُ الرِّيحَ فَتُبْرِقُ سَحَابًا فِيَبُطُّهُ فِي
السَّمَاءِ كَيْفَ يَشَاءُ وَيَجْعَلُهُمْ كَيْسَفًا فَتَرَى الْوَدْقَ
يَخْرُجُ مِنْ خِلَالِهِ فَإِذَا أَصَابَ بِهِ مَن يَشَاءُ مِنْ
عِبَادِهِ إِذَا هُمْ يَسْتَبِشِرُونَ ﴿٤٨﴾

49. waxayna ahaayeen soo dajinta Roobka ka hor kuwo Quusan.

وَإِن كَانُوا مِن قَبْلِ أَن يُزَلَّ عَلَيْهِمْ مِن قَبْلِهِ
لَمُبَشِّرِينَ ﴿٤٩﴾

50. ee day naxariista Eebe raadkeeda sida Alle ugu nooleeyo dhulka intuu dhintay ka did Allahaa wuxuu nooleeyaa wixii dhintay wax walbana waa karaa.

فَأَنْظِرْ إِلَىٰ آثَارِ رَحْمَتِ اللَّهِ كَيْفَ يُحْيِي الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا إِنَّ ذَٰلِكَ لَمُعْجَمٌ مَّا يُوَفَّقُ ۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٥٠﴾

Roobka iyo naxariista Eebaa keena, si uu ugu nooleeyo addoomadiisa iyo Dhulka ay ku noolyihiin korkiisa waana kan rasuullo badan u dira Umadihii hore iyagoo xaq wata kuwii beeniyeena looga aarsaday, Eebe waa u gargaare mu'miniinta Xaqa ah, keenida Roobka lagu farxina waxay ku tusin awoodda Eebe iyo unuu wax walba karo. At-Ruum (46-50).

51. haddaan ku diro Dabaylo (daran) Beertooda ay arkaan iyadoo doorsoon, waxay markaas ka did noqdaan kuwo Gaalooba.

وَلَيْنَ أُرْسِلْنَا بِحَا فِرَؤُوهُ مُصْفَرًّا لَطَلُوهَا مِنْ بَعْدِهِ يَكْفُرُونَ ﴿٥١﴾

52. adigu wax ma maqashiin kartid kuwo dhintay, Mid dhagala' oo jeedsa-dayna wax ma maqashiin kartid.

فَأِنَّكَ لَا تَسْمَعُ الْكَلِمَةَ وَلَا تَسْمَعُ الدَّعَاءَ إِذَا تَوَلَّوْا مُدْبِرِينَ ﴿٥٢﴾

53. ruux indha la'na baadi kama hanuunin kartid, ma maqashiinkartid (xaqa) qolo rumeysay aayaadkanaga mooyee, muslimiina ah.

وَمَا أَنْتَ بِهَادٍ الْعَمَىٰ عَنْ صُلَىٰ لِيَوْمِئِذٍ تَسْمَعُ إِلَّا مَنْ يُؤْمِنُ بِآيَاتِنَا فَهُمْ مُسْلِمُونَ ﴿٥٣﴾

54. Eebe waa kan idin ka abuuray Tabaryare, hadana idinka yeelay Tabaryare ka dib xoog, hadana xoog dabadi idinka yeelay Tabaryari iyo Gabow, wuxuu doono yuu abuuraa, waana wax walba oge, wax walba kare.

۞ اللَّهُ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ ضَعْفٍ ثُمَّ جَعَلَ مِنْ بَعْدِ ضَعْفٍ قُوَّةً ثُمَّ جَعَلَ مِنْ بَعْدِ قُوَّةٍ ضَعْفًا وَوَسْبَةً ۖ يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ وَهُوَ الْعَلِيمُ الْقَدِيرُ ﴿٥٤﴾

Dabayshu waa qayb ka mid ah khalqiga Eebe, waxna Eebe waa ku anfacaa, marmarna waxay dhibtaa si loogu edbiyo kuwa leexda, inse la gaaloobo ma aha hadday, dhibaato keento, xaqdiidana Eebe uunbaa hanuuninkara ama musliminkara, illeen Eebaa dadka mariya marxalado kala duwa, sida tabaryari-daxoogga Duqnimada iyo Geeridaba, maxaayeley ogaansho iyo awoodba isagay ku dhamaadaan. Ar-Ruum (51-54).

55. maalinta Qiyaamadu kacdo waxay ku dhaartaan dambiiayaashu inayan nagaanin Saacad mooyee, saasaana (xaqa) looga leexiyey.

وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ يُقْسِمُ الْمُجْرِمُونَ مَا لِيَأْتِيَنَا بِقُرْآنٍ كَذَّابٍ كَاؤُوا يُؤْفِكُونَ ﴿٥٥﴾

56. kuwii waxay dheheen cilmiga iyo

وَقَالَ الَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ وَالْإِيمَانَ لَقَدْ لَبِئْتُمْ

iimaanka la siiyey waad ku nagaateen Qadarka Eebe tan iyo maalinta soobixinta, kanna waa maalintii soobixinta, laakiin waxaad ahaydeen kuwo aan ogayn.

57. Maanta (Qiyaamada) ma anfacco kuwii dulmiga falay cudur daar iyo toobad keen.

58. dhab ahaanbaan ugu caddaynay Dadka Quraankan dhexdiisa tusaale kasta, haddaadna ula timaado aayad waxay dhihi kuwii Gaaloobay waxaan baadil (xumaan) ahayn kuma sugnidin.

59. saasaa Eebe u daboolaa Quluubta kuwa wax ogayn (wax anfaca).

60. ee samir yabooha Eebe waa xaqa, yeyna ku fududayn kuwaan yaqiinsanayn (Xaqa).

فِي كِتَابِ اللَّهِ إِلَى يَوْمِ الْبَعْثِ فَهَذَا يَوْمُ الْبَعْثِ
وَلَسْ كِتَابُكُمْ كِتَابُكُمْ لَا تَعْمُونَ ﴿٥٧﴾


فَيَوْمَئِذٍ لَا يَنْفَعُ الَّذِينَ ظَلَمُوا مَعَدْرَتُهُمْ
وَلَا هُمْ يُسْتَعْتَبُونَ ﴿٥٧﴾

وَلَقَدْ صَرَّفْنَا لِلنَّاسِ فِي هَذَا الْقُرْآنِ مِنْ كُلِّ
مَثَلٍ وَلَئِنْ رَجَعْتُمْ بِنَافِلِهِمْ لَيَقُولُنَّ الَّذِينَ
كَفَرُوا وَإِنْ أَنَسْنَا لَهُمُ الْمِطْلُوتَ ﴿٥٨﴾

كَذَلِكَ يَطْمَعُ اللَّهُ عَلَى قُلُوبِ الَّذِينَ لَا يَعْمُونَ ﴿٥٩﴾

فَأَصْبِرْ إِنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ وَلَا يَسْتَخِفُّكَ الَّذِينَ
لَا يُؤْفِقُونَ ﴿٦٠﴾

Saacadda Qiyaame waa arrin daran oo culus Gaalada dambiilayaasha ahna waqtigu wuu ka qasmi waxayna ku dhaaran dhibaataada darteed inayan adduunkii ku nagaamin Saacad wax ka badantaasna waxay ku tusin inaan nicmada adduun iyo noloshiisa wax u tarayn ruuxii dhuma, Mu'miniintase waa u xisaabanyahay waqtigu calaacalna wax mataro Qiyaame, illeen quraankaa Eebe wax walba ku caddeeyaye madax adayg iyo xaqqiidna waa dabeecadda Gaalada, ee xaqa ku samra una adkaysta. Gaalana yeyna idin dhummin. Ar-Ruum (55-60).



Suurat Luqmaan

سُورَةُ لُقْمَانَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. waxay ku tusin mucjisada Quraanka (sida soo hormartay).

الْعَرَبِ ①

2. tan waa aayaadka Kitaabka (Quraanka) Xigmada leh.

تِلْكَ آيَاتُ الْكِتَابِ الْحَكِيمِ ②

3. waana hanuunka iyo naxariista samafalayaasha.

هُدًى وَرَحْمَةً لِّلْمُحْسِنِينَ ③

4. kuwa salaadda ooga, Zakadana bixiya, iyagoo aakhiro yaqiinsan.

الَّذِينَ يُؤْتُونَ الصَّلَاةَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَهُمْ بِالْآخِرَةِ هُمْ يُوقِنُونَ ④

5. kuwaasi waxay ku suganyihiin hanuun Eebe, kuwaasina waa kuwa liibaanay.

أُولَئِكَ عَلَى هُدًى مِّن رَّبِّهِمْ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ⑤

6. Dadka waxaa ka mid ah kuwo gadan hadal wax shuqliya si uu uga dhumiyo (Dadka) Jidka Eebe iyagoon wax ogayn, Jidka Eebena ku Jees jeesa, kuwaasi waxay mudan Cadaab Dulleeya.

وَمِنَ النَّاسِ مَن يَشْتَرِي لَهْوَ الْحَدِيثِ لِيُضِلَّ عَن سَبِيلِ اللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَيَتَّخِذَهَا هُزُوًا أُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ مُّهِينٌ ⑥

7. marka lagu akhriyo aayaadkanaga wuu jeedsadaa isagoo iskibrin, sidii isagoon maqal, oo dhagihiiisu culusyihiin, ugu bishaaree Cadaab daran.

وَإِذَا نَسَلَ عَلَيْهِ إِثْمُهُ وَعَازَنُوهُ لِئَسْتَكْبِرَ كَان لَّهٗ يَسْمَعُهَا كَأَن فِيٓ آذَانِهِ وَقُرْآٰنٌ فَتَنَةٌ ⑦
بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ⑦

Macnaha aayadahan oo kale waxaa ka hadasha Suuratul baqara oo ah in Quraanku hanuun iyo naxariis u yahay Sama falayaasha, Wanaagga falay oo shareecada raacay, Salaaddana' oogay Zakadana bixiyey, Aakhirana yiqiinsaday, kuwaasna waxaa u dambeeyn liibaan, kuwaas ka leexday Jidka toosan, hadalada wax shuqliyana soo gata. xaqana ku jees jeesa, marka Quraanka lagu akhriyana Jeedsada oo is kibriya sidii isaga oon maqal oo Dhaga la' waxay mudan kuwaasu Cadaab wax Dulleeya oo Daran. Cabdullaahi Ibnu Maseud wuxuu yidhi: Eebaha isaga mooyee aan Ilaah kale jirin baan ku dhaaran hadalka wax shuqliya waa heesta. Xasan Basrina saasoo kaluu yidhi waa heesta iyo Durbaanka. Luqmann (1-7).

8. kuwa rumeeyey (Xaq) camal wa-

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ جَنَّاتٌ

naagsanna falay waxay mudan Janatu Naciima.

النَّعِيمِ ٨

9. iyagoo ku waari dhexdeeda waana yabooH Eebe oo xaq ah, Eebana waa adkaade falsan.

خَالِدِينَ فِيهَا وَعَدَّ اللَّهُ حَقًّا وَهُوَ الْعَزِيزُ

الْحَكِيمُ ٩

10. isagaa abuuray Samooyinka Tiir aad aragtaan la'aantiis, dhulkana wuxuu ku tuuray Buuro (suga) inayan dhaqdhaqaaqin, wuxuuna ku fidiyey dhexdiisa daabad kasta, Samadana waxaan ka soo dejinay Biyo, waxaana ku soo bixiney nooc kasta oo quruxsan.

خَلَقَ السَّمَوَاتِ بِغَيْرِ عَمَدٍ تَرَوْنَهَا وَالْأَرْضِ فِي الْأَيَّامِ

رُوسَى أَنْ تَمِيدَ بِكُمْ وَيَتَّخِذَ فِيهَا مِنْ كُلِّ صَائِبَةٍ وَأَنْزَلْنَا

مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَنْبَتْنَا فِيهَا مِنْ كُلِّ زَوْجٍ

كَيْرٍ ١٠

11. kaasi waa abuurkii Eebe, ee i tusiya waxay abuureen kuwa ka soo hadhay Eebe, saas ma aha, ee dulmi falayaashu waxay ku suganyihiin baadi Cad.

هَذَا خَلْقُ اللَّهِ فَأَرُونِي مَاذَا خَلَقَ الَّذِينَ مِنْ دُونِهِ

بَلِ الظَّالِمُونَ فِي ضَلَالٍ مُبِينٍ ١١

Kuwa liibaanay Aakhiro waxaa ka mid ah kuwa Eebe iyo Rasuuladiisa rumeeeyey, Camallada Waanaagsan ee shareecada waafaqsanna la yimaada, markaasuu Eebe ku baraarujiyey Qudradiisa siduu Cirka u koryeelay Tiir aan aragno la'aantiis, Dhulkana uu Buuro ugu sugay, wax kasta oo noola ugu beeray oo Dhulka ku socda, Cirkana Biyo wax walba ku bixiyo ka soo dajiyey, waana kaas abuurka Eebe ee maxay abuureen wax yaalaha kale ee la caabudo Eebe ka sokow, ma jiro waxay abuureen ee ka Caabudi yaa baadil Cad ku sugan. Luqmaan (8-11).

12. dhab ahaan ayaan luqmaan u siinay Xigmad iyo inuu Eebe ku mahdiyo, ruuxii mahdiya wuxuu uun u mahdiyay naftiisa, ruuxii Gaaloobana Eebe waa ka kaaftoonyahay waana amaananyahay.

وَلَقَدْ آتَيْنَا لُقْمَانَ الْحِكْمَةَ أَنْ اشْكُرْ لِلَّهِ وَمَنْ

يَشْكُرْ فَإِنَّمَا يَشْكُرُ لِنَفْسِهِ وَمَنْ كَفَرَ فَإِنَّ اللَّهَ

عَنِّي حَمِيدٌ ١٢

13. (xusuuso) markuu ku yidhi Luqmaan Wiilkiisa isagoo waanin Wiilkayow Eebe waxba hala wadaajinin, shirkigu waa dulmi weyne.

وَإِذْ قَالَ لُقْمَانُ لِابْنِهِ وَهُوَ يَعِظُهُ يَا بُنَيَّ لَا تُشْرِكْ

بِاللَّهِ إِنَّ الشِّرْكَ لَظُلْمٌ عَظِيمٌ ١٣

14. waxaan u dardaaranay dadka labadiisii Waalid, way sidday Hooyadiis iyadoo tabaryar tabar yari kalana ku sugan, Gudhidiisuna waa Labo sano ee ku mahadi ani iyo Labadaadii Waalid, xagaygaana loo ahaan.

وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ حَمَلَتْهُ أُمُّهُ وَهْتًا

عَلَى وَهْنٍ وَفِصْلَهُ فِي عَامَيْنِ أَنْ اشْكُرْ لِي

وَلِوَالِدِكَ إِلَيَّ الْمَصِيرُ ١٤

15. hadday kugula dadaalaan (Labada waalid) inaad ii shariig yeesho (ila wadaajiso) waxaadan aqoon u lahayn ha ku addecin kulana noolow adduunka si fiican, raacna Jidka kuwa ii noqda, xagayga yaa laydiin soo celin waxaana idiinka warami waxaad camalfali jirteen.

وَأَنْذِرْهُمْ يَوْمَ الْمَوْتِ إِذْ يُخْرَجُونَ مِنْ أَجْزَامِهِمْ سَبِيلًا مِمَّنْ أَنْتَ إِلَيْهِمْ إِنَّكَ بِرُءُوسِ الْعَرْشِ الْمُبِينِ ﴿١٥﴾

Luqmaan wuxuu ahaa Nin suuban oo umadihii hore ka mid ah' Eebana siiyey Cilmi naafic ah iyo Caqli toosan' Eebana ku mahdin jiray, Wiilkiisana wuxuu u dardaarmay dardaaran kii u fiicnaa oo ah inuu Eebe kaliya caabudo, labada waalidna wanaag u falo' Gaar ahaan Hooyada u soomartay dhib daran uur iyo Nuujinba, waxaa kaloos u dardaarmay in gaalimadu tahay dulmiga ugu wayn.

Mahadda Eebe iyo kan labada Waalid, xumaantoon lagu adeecin iyo gaalimada, in wanaag lagula noolaado' Eebe Jidkiisana lagu toosnaado' loona toobadkeeno' dhammaan waa waxyaalaha lays faray. Maaad Binu Jabal yaa istaagay isagoo khudbad akhriin wuxuuna ku mahdiyey Eebe oo amaanyar markaasuu ku yidhi: Anigu waxaan ahay Rasuulkii Eebe miduu ugu soo diray xaggiina inaad Eebe caabudaan, waxna la wadaajinin, inaad i adeecdaan idinka hagrahmayo khayre, xagga Eebaa loo ahaane Janno ama Naare, waa nagaadi aan geedi lahayn, iyo waarid aan geeri lahayn.

Waxaa wariyey Ibnu abii xaatim. Luqmaan (12-15).

16. Wiilkayow hadday xumaantu tahay Xabbaad Khardal ah oo kale (wax yar) oo sallax dhexdii ku sugnaato ama samooyinka dhexdooda ama Dhulka dhexdiisa wuu keeni Eebe, Eebana waa oge xeeldheer.

يَسْئَلُ عَنْهَا مَنْ نَكَهُ مِنْ خَلْقٍ فَتَكُنُ فِي صَخْرَةٍ أَوْ فِي السَّمَاءِ أَوْ فِي الْأَرْضِ يَأْتِي بِهَا اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٌ ﴿١٦﴾

17. Wiilkayow oog Salaadda, oo far waanaagga oo reeb waxa lanaco kuna Samir waxa ku gaadha, arrintaasu waxay ka midtahay umuuraha wanaagsane.

يَسْئَلُ عَنْهَا الصَّلَاةَ وَأَمْرًا بِالْمَعْرُوفِ وَأَنْتَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَأَصْبِرْ عَلَى مَا أَصَابَكَ إِنَّ ذَلِكَ مِنْ عَزْمِ الْأُمُورِ ﴿١٧﴾

18. hana ka jeedin Wajiga dadka hana ugu socon dhulka kibir, Eebana ma jecla mid kastaoo isla weyn oo faanbadane.

وَلَا تَصْغُرْ خَدَّكَ لِلنَّاسِ وَلَا تَمْشِ فِي الْأَرْضِ مَرْحًا إِنَّ اللَّهَ يُخَيِّطُ كُلَّ مَخْتَالٍ فَخُورٌ ﴿١٨﴾

19. socodkaagana ku dhexdhexayso, hoosna u dhig Codkaaga, Cod waxaa ugu xun Codka Dameerahee.

وَأَقْصِدْ فِي مَشْيِكَ وَأَعْضُضْ مِنْ صَوْتِكَ إِنَّ أَنْكَرَ الْأَصْوَاتِ لَصَوْتُ الْحَمِيرِ ﴿١٩﴾

20. miyeydaan arkayn in Eebe idiin sakhiray waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan oo idin huwiyey Nicmadiisa

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ سَخَّرَ لَكُمْ مِمَّا فِي السَّمَاءِ وَمِمَّا فِي الْأَرْضِ وَأَسْبَغَ عَلَيْكُمْ نِعْمَهُ ظَهْرَهُ وَبِاطِنَهُ وَمِنَ النَّاسِ

mid muuqata iyo mid qarsoonba, Dadkana waxaa ka mid ah kuwo Eebe ku murmi Cilmi iyo hanuun iyo Kitaab nuuriya la'aantiis.

21. marka loo dhaho raaca waxa Eebe soo dajiyeyna waxay dhahaan waxaan nu raaci waxaan ka helay Aabayaalkanno, haduu Shaydaan ugu yeedho Cadaabka Sacirana (miyey raaci).

Wax kastoo ruuxu falo haba yaraadee Eebe waa ogyahay meelkaste ha ku jiree, Dhagax, Cir ama Dhulba. Salaadda oo la oogo, wanaagoo la falo dadka, xumaanta oo laga reebo, dhibka oo loo adkeysto, Dadkoo si fiican loo qaabilo, Dhulkoo si fiican loogu socdo, Codkoo hoos loo dhigo iyo kibirkoo laga tagana waa wanaagga Diinta Islaamku farayso Luqmaanna Wiilkiisa u dardaarmey. Eebana wuu u nicmeeyey Dadka, mana haboona muran xaq darro iyo raacid dad kale oo dhunsanaa iyo yeedhida shaydaan. Eebana wuu muujin wax kastoo lafalo meel kastoo lagu falo Nabigaa yidhi macnahaas oo kale. Luqmaan (16-21).

22. ruuxii u jeediya Wajigiisa xagga Eebe isagoo samo fali wuxuu qabsaday guntin (Ballan adag), xagga Eebaana Cihdhibta arrimuhu u noqon.

23. Ciddiise Gaalowda yuuna ku walbahaar galin Gaalimadiisu, xagganagay u soo noqon waxaana uga warramaynaa waxay camalfali jireen, illeen Eebaa og waxa laabta ku sugane.

24. waannu u raaxayn wax yar, markaasannu u dhibaatayn (u iili) Cadaab adag.

25. haddaad waydiisid yaa abuuray samooyinka iyo dhulka waxay odhan ilaahay, waxaad dhahdaa mahad Eebaa iska leh, badankoodse ma oga.

26. Eebaa iska leh waxa samooyinka iyo Dhulka ku sugan, Eebana waa hodan amaanan.

مَنْ يُجَادِلْ فِي اللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَلَا هُدًى وَلَا كِتَابٍ مُنِيرٍ ﴿٤١﴾

وَإِذْ أَيْدِي لَهُمْ أَنْسَعُمَا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ قَالَ لَوْ بَلَّ بَنِي نَبِيِّعٍ مَا وَجَدْنَا عَلَيْهِمْ آيَةً تَأْوِيلُهُمْ كَانُوا الشَّيْطَانِ يَدْعُوهُمْ إِلَىٰ عَذَابِ السَّعِيرِ ﴿٤٢﴾

* وَمَنْ يُسَلِّمْ وَجْهَهُ إِلَى اللَّهِ وَهُوَ مُحْسِنٌ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ بِالْعُرْوَةِ الْوُثْقَىٰ وَإِلَى اللَّهِ عَاقِبَةُ الْأُمُورِ ﴿٤٣﴾

وَمَنْ كَفَرَ فَلَا يَحْزُنكَ كُفْرُهُمْ إِلَيْنَا مَرْجِعُهُمْ فَنُنَبِّئُهُمْ بِمَا عَمِلُوا إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿٤٤﴾

نَسْتَعْتَمِرُ قَلِيلًا نَّمُتَّصِرُ لَهُمْ إِلَىٰ عَذَابٍ عَلِيظٍ ﴿٤٥﴾

وَلَيْنَ سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ لَيَقُولُنَّ اللَّهُ قُلِ الْحَمْدُ لِلَّهِ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٤٦﴾

لِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ إِنَّ اللَّهَ هُوَ الْعَلِيُّ الْحَمِيدُ ﴿٤٧﴾

Cidii Eebe u hogaansanta wuxuu farayna yeesha oo wanaagsanaata wuxuu ku liibaani Ballan adag iyo Qabsasho Xadhiga Eebe, ruuxiise gaalooba isaga unbaa isdhibay, Eebana wuu sugi mudo yar wuxuuna ku abaal marin cadaab adag.

Inkastoy Gaaladu Eebe diidi xagga daahirka hadana way ogyihiin in isagu abuurray Cirka iyo dhulka. Mahadna Eebaa iska leh iyo xukunka Cirka iyo Dhulka waana hodan ammaan mutay. Luqmaan (22-26).

27. hadday waxa dhulka ku sugan oo geeda ah Qalimo noqdaan Badduna khadayso oo gadaasheeda Todobo baddood yihiin madhamaateen Kalimooyinka Eebe, Eebana waa adkaade falsan.

وَلَوْ أَنَّمَا فِي الْأَرْضِ مِنْ شَجَرَةٍ أَقْلَمٌ وَالْبَحْرُ مُمَدَّدَةٌ
مِنْ بَعْدِهِ سَبْعَةُ أَبْحُرٍ مَا نَفِدَتْ كَلِمَاتُ اللَّهِ
إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٧﴾

28. abuurkiinna iyo soobixintiinu ma aha sida Nafkaliya mooyee (Fudaydka), Eebana waa maqle arke ah.

مَا خَلْقَكُمْ وَلَا يَعْلَمُ الْأَكْفَابِينَ وَاحِدٌ إِنَّ اللَّهَ
سَمِيعٌ بَصِيرٌ ﴿٢٨﴾

29. miyeydaan ogayn in Eebe Habeenka dhex galiyo Maalinta, Maalintana dhexgaliyo Habeenka sakhirayna Qoraxda iyo Dayaxa, mid kastana uu u socdo muddo magacaaban, Eebana waxaad Camalfalaysaan waa ogyahay.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يُولِجُ اللَّيْلَ فِي النَّهَارِ وَيُولِجُ النَّهَارَ
فِي اللَّيْلِ وَسَخَّرَ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ كُلَّهُمَا يَجْرِي إِلَىٰ أَجَلٍ
مُّسَمًّى وَأَنَّ اللَّهَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٢٩﴾

30 Taasna waa in Eebe xaq yahay waxay caabudi ee ka soohadhayna baadil yahay iyo in Eebe yahay Sarreeye wayn.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ اللَّهَ هُوَ الْحَقُّ وَأَنَّ مَا يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ
الْبَطْلُ وَأَنَّ اللَّهَ هُوَ الْعَلِيُّ الْكَبِيرُ ﴿٣٠﴾

31. miyeydaan ogayn in Doontu dhexsocoto Badda Nicmada Eebe darteed si uu idiin tusiyo aayaadkiisa, arrintaasna aayaadbaa ugu sugan Samirbadane shugri badan oo dhan.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ الْفُلْكَ يَجْرِي فِي الْبَحْرِ بِنِعْمَتِ اللَّهِ لِيُرِيَكُمْ
مِنْ آيَاتِهِ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِّكُلِّ
صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿٣١﴾

32. marka hirku daboolo dadka oo Hoos la moodo waxay baryaan Eebe iyagoo u kali yeeli Diinta (Cibaadada) markuu u koriyo xagga Barrigana waxaa ka mid noqon Dadka mid dhexdhexaysan, mana diido aayaadkanaga mid khaa'in ah oo gaalimo badan mooyee.

وَإِذْ عَشِيَ غَرِيضٌ جَاءَ الظَّالِمِينَ دَعَا اللَّهُ مُخْلِصِينَ
لَهُ الَّذِينَ قَالُوا لَمَّا نَجَّاهُمْ إِلَى الْبَرِّ فَمَنْهُمْ مُّقْتَصِدٌ وَمَا
يَجْحَدُ بِآيَاتِنَا إِلَّا الْأَكْثَرُ خَسَارًا كُفُورًا ﴿٣٢﴾

Cilmiga Ilaahay waa waasac Hadii Geedaha qalin lagadhigo Badahana Anqaas ma dhamaado Cilmigiisu, Eebana waa u fududahay abuuridda iyo soo bixintuba, waana Eebaha Nusqaamiya Habeenka iyo Dharaarta sakhirayna Qoraxda iyo Dayaxaba inta muddadoodii laga gaadhi. Waana Eebaha xaqa ah waxa ka soohadhay ee la caabudana wax ka jira ee sarrreeye weyn ah Dadkana u sahlay Markabka Badda dhexsocda, si ay ugu mahdiyaan Nicmadiisa, markey Badda marina Eebey

Baryaan Gaaladu, Markey nabadgalaanna way jeedsadaan.

Rasuulkuna wuxuu yidhi: (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebow ma koobna amaantaadu Ee waa saad adigu isu amaantay. Luqmaan (27-32).

33. Dadow ka dhawrsada Eebihiin oo ka Cabsada Maalin uusan ka abaalmarinayn Waalid Ilmihiisa, Ilmuhuna Waalidka waxba, yabooha Eebana waa Xaq, ee yeyna idinku dhagrin nolosha adduunyo, yuuna idinku dhagrin Eebe dhagar badane (shaydaan).

يَتَأْتِيهَا النَّاسُ أَتْفُورًا يَكُومُونَ وَأَخْشَوْا أَيَّامًا لَا يَحْجِرِي
وَالِدَهُ عَن وِلْدَانِهِ وَلَا مَوْلُودٌ هُوَ جَائِزٌ عَن وِلْدَانِهِ شَيْئًا
إِنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ فَلَا تَغْرِبَنَّكُمْ الْحَيَاةُ الدُّنْيَا
وَلَا يَغْرِبَنَّكُمْ بِاللَّهِ الْعَظِيمِ ﴿٣٣﴾

34. Eebe agtiisuu yahay ogaanshaha Saacadda (Qiyaame) iyo Roob di'iddu, wuxuuna ogyahay waxa makaanka (Ilma galeenka) ku sugan, nafna ma oga waxay mudan Barri, Nafna ma oga Dhulkay ku dhiman, Eebaa og xeelna dheer.

إِنَّ اللَّهَ عِنْدَهُ عِلْمُ السَّاعَةِ وَيُنزِلُ الْعَنَبَ وَيَعْلَمُ
مَا فِي الْأَرْحَامِ وَمَا تَدْرِي نَفْسٌ مَّاذَا تَكْسِبُ غَدًا
وَمَا تَدْرِي نَفْسٌ بِأَيِّ أَرْضٍ تَمُوتُ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ
خَبِيرٌ ﴿٣٤﴾

Dhab ahaan nolosha adduun waa dhalanteed, ruux suudoono ha ugu raaxaystee, Cidii Caqli lehna waa inay Camalfashaa ayna Dhagraminna, maxaayeeley waxaa imaan Maalin Cidna Cid kale ayan wax u tarayn, xaataa labada is dhashayba ha ahaatee.

Qiyaamadu markey dhici, Roobku markuu di'i iyo waxa uurka ku jiraba Eebaa og, Nafna ma oga waxay mudan Barri iyo Halkey ku dhiman midna, Eebe unbaa og.

Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu yidhi: Shan ilaahay unbaa og Saacadda Qiyaame, Roob kolkuu imaan, Waxa uurka ku jira, Nafi waxay mudan wakhtiga soosocda iyo nafi meeley ku dhiman.

Waxaa wariyey Bukhaari iyo Axmed. Waxa kalase ee lasheeg sheego waa male iyo war. Cilmiga dhabta ahse Eebe agtiisuu jiraa. Luqmaan (33-34).



Suurat As-Sajdah

سُورَةُ السَّجْدَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. waxay ku tusin mucjiseda Quraanka.

الْعَلَمِ ۝١

2. soo dajinta Quraanka shaki kuma jiro, wuxuuna ka soo dagay Eebaha Caalamka xaggiisa.

تَنْزِيلَ الْكِتَابِ لَأَرْبَبَ فِيهِ مِنْ رَبِّ الْعَالَمِينَ ۝٢

3. mise waxay dhihi waxaa been abuurtay (Nabiga), saas ma aha ee waa xaq Quraanku Eebahaa xaggiisa ka yimid si aad ugu digitid qoom uusan u imaannin dige kaa horreeya, si ay u hanuunaan.

أَمْ يَقُولُونَ افتره بل هو الحق من ربك لشئذوقا مما آتاهم من تدبير من قبلك لعلهم يتقون ۝٣

4. Eebe waa kan ku abuuray Samooyinka, iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya Lix maalmood dhexdeed, markaasna ka sara maray Carshiga idiinmana sugnaannin Eebe ka sokow wali (gargaare) iyo shafeece midna, ee miyeydaan wax xusuusanayn.

اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ اسْتَوَىٰ عَلَى الْعَرْشِ مَا لَكُمْ مِنْ دُونِهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا شَفِيعٍ أَفَلَا تَتَذَكَّرُونَ ۝٤

5. amarka Eebbaa maamula, kana soo dejiya Samada una soo dejiya xagga Dhulka, markaasaa amarkaasi xagga Eebe u koraa Maalin qaddarkeedu yahay Kun sano oo waxaad tirinaysaana.

يَذَرُ الْأَمْرَ مِنَ السَّمَاءِ إِلَى الْأَرْضِ ثُمَّ يَرْجِعُ إِلَيْهِ فِي يَوْمٍ كَانَ مِقْدَارُهُ أَلْفَ سَنَةٍ وَمَا تَعُدُّونَ ۝٥

6. kaasina waa Eebaha og waxa maqan iyo waxa joogaba, ee adkaada ee Naxariista.

ذَٰلِكَ عِلْمُ الْعَلِيِّ وَالشَّهِدَةِ الْعَزِيزِ الرَّحِيمِ ۝٦

Eebe wuxuu halkan ku sheegay inuu Quraanku ka soo dagay xagga Eebe, wax shaki ahna ku jirin, wax Nabiga Muxamed ah Jeebkiisa kala yimidna ahayn, si loogu digo Dad jaahiliin ah oon hadda ka hor wax u diga helin, waxaa kalooy aayaduhu caddayn inuu ilaahay ku abuuray wax waba Lix Maalmood, wax Eebe ka soo hadhay oo wax anfici karaana uusan jirin Idam Eebe la'aantiis, wax walbana isagaa maamula, wax walbana waa ogyahay. As-Sajdah (1-6).

7. Eebaa wanaajiyey abuuridda wax kasta, wuxuuna ka billaabay abuuridda Dadka Dhoobo, (Nabigii Aadam ahaa).

الَّذِي أَحْسَنَ كُلَّ شَيْءٍ خَلَقَهُ، وَبَدَأَ خَلْقَ الْإِنسَانِ
مِن طِينٍ ﴿٧﴾

8. markaas kayeelay faraciisii mid ka soo taxma Biyo tabaryar.

ثُمَّ جَعَلْنَا سَلَكَهُ مِنَ السُّلَالَةِ مِنْ مَّاءٍ مَهِينٍ ﴿٨﴾

9. markaas ekeeyey oo ruuxdiisa ku afuufay idiinna yeelay maqal, Aragyaal iyo quluubba, waxyar baadse Eebe ku mahdisaan.

ثُمَّ سَوَّاهُ وَنَفَخَ فِيهِ مِنْ رُوحِنَا، وَجَعَلَ لَكُمُ السَّمْعَ
وَالْأَبْصَارَ وَالْأَفْئِدَةَ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ﴿٩﴾

10. waxay dhaheen Gaaladii ma marka-kaan ku dhexlunno dhulka (geeriyoon-no) yaa abuurid cusub nala abuuri, saas ma aha ee iyagu la kulanka Eebahood bay ka gaaloobeen.

وَقَالُوا إِنَّا وَصَلْنَا فِي الْأَرْضِ أَنزِلْنَا لَكُمُ الْخَلْقَ جَدِيدًا
بَلْ هُمْ بِلِقَاءِ رَبِّهِمْ كَافِرُونَ ﴿١٠﴾

11. waxaad dhahdaa waxaa idin oofsan (dili) Malagga mowdka laydiin wakiis-hay, markaasaa xagga Eebihiin laydiin celin.

* قُلْ يَتَوَفَّكُم مَلَائِكَةُ الْمَوْتِ الَّتِي أُورِثُكُمْ وَإِلَىٰ رَبِّكُمْ تُرْجَعُونَ ﴿١١﴾

12. haddaad arki lahayd marka dam-biilayaashu madaxa hoos u dhigi (qiyaamada) Eebahood agtiisa (iyagoo dhihi) Eebahanow waan aragnay waana maqalay ee naceli si aan camalfiican u fallo, waan yaqininnaye (waxaad arki lahayd wax yaableh).

وَلَوْ تَرَىٰ إِذِ الْمُرْسَلُونَ نَأْسُوا رُءُوسِهِمْ عِندَ
رَبِّهِمْ رَبَّنَا أَبْصَرْنَا وَسَمِعْنَا فَارْجِعْنَا نَعْمَلْ
صَالِحًا إِنَّا مُوقِنُونَ ﴿١٢﴾

13. haddaan doonno waxaan siin lahayn (ku toosin lahayn) Nafkasta hanuunkeeda hase yeeshee waxaa hormaray Hadalkaygii in laga buuxin Jahannamo Jinni iyo Insi dhammaan.

وَلَوْ شِئْنَا لَآتَيْنَاكَ لَنْتَاهُ لَقَدْ نَفِيسٌ هَدْيَهَا وَلَكِنَّ
حَقَّ الْقَوْلُ مِنِّي لَأَمْلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنَ الْجِنَّةِ وَالنَّاسِ
أَجْمَعِينَ ﴿١٣﴾

14. ee dhadhamiya halmaanshihiinnii la kulanka Maalintiinnan (qiyaame) annaguna waan idinka tagaynaa (maanta) ee dhadhamiya cadaabka waaridda camalkiinnii dartiis.

فَذُوقُوا بِمَا نَسِيتُمْ لِقَاءَ يَوْمِكُمْ هَذَا إِنَّا
نَسِينَاكُمْ وَذُوقُوا عَذَابَ الْخَالِدِ بِمَا
كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٤﴾

wax walba Eebaa abuuray, wanaajiyeyna abuurkiisa, Nabi Aadamna dhoobo ka abuuray Faraciisana Biyo ka ahaysiiyay, ruux, Maqal Arag iyo caqlina u yeelay, laakiin Dadku waxyar bay Eebe ku mahdiyaan. Gaaladuna waxayba diidi soobixinta iyo la kulanka Eebahood, waxaase dhab ah inay dhiman Eebana ay u noqon Maalinta qiyaame, iyagoo dullaysan oo madaxa raaricin, oo xumaan oo idil qirsan, Eebana ay warsan in adduunkii dib loogu celiyo si ay camalfiican ufalaan, hasayeeshee calaal

wax uma taro maalintaas, cadaab iyo dulli jooqta ah yayna lakulmi. Mujaahid wuxuu yidhi: Malakumowd waxaa loo koobay dhulka oo looga dhigay weel oo kale uu wax ka qaadan markuu rabo. As-Sajdah (7-14).

15. waxaa uun rumayn aayaadkannaga kuwa marka lagu waaniyo aayadaha sujuud la dhaca kuna tasbiixsada mahadda Eebahood iyagoon is kibrinayn (isla waynayn).

إِنَّمَا يُؤْمِنُ بِعَاقِبَتِنَا الَّذِينَ إِذَا دُكِرُوا بِهَا
خِرُوا سَجْدًا وَسَبُّحًا لِحَمْدِ رَبِّهِمْ وَهُمْ
لَا يَسْتَكْبِرُونَ ﴿١٥﴾

16. waxayna ka dheeraataa dhinacya-doodu jiiifka iyagoo baryi Eebahood cabsi iyo rajaynba waxaan ku arzuq-nayna wax ka bixiya.

تَتَجَاوَزُ جُودُهُمْ عَنِ الْمَصَاحِبِ يُدْعُونَ رَبَّهُمْ
خَوْفًا وَطَمَعًا وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنفِقُونَ ﴿١٦﴾

17. ma oga Nafu waxa loo qariyay kuwaas oo Indho ku qaboowsadaan abaal marin waxay camalfalayeen dartiis.

فَلَا تَعْلَمُ نَفْسٌ مَّا أُخْفِيَ لَهُم مِّن قُرَّةِ أَعْيُنٍ جَزَاءً
بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٧﴾

18. ruux Mu'min ah ma la midbaa mid faasiq ah, ma eka.

أَمَّن كَانَ مُؤْمِنًا كَمَن كَانَ فَاسِقًا لَّا يَسْتَوُونَ ﴿١٨﴾

19. kuwa rumeeyay (xaqa) oo camal fiican falay waxay mudan Jannooyinka Ma'wa martiqaad, waxay camal falayeen dartiis.

أَمَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَلَهُمْ جَنَّاتُ
الْمَأْوَىٰ نُزُلًا بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٩﴾

20. kuwase faasiqoobay waxay ku hoyan Naar, markay doonaan inay ka baxaanna waa lagu celin dhexdeeda waxaana lagu dhihi dhadhamiya Ca-daabka Naartii aad beenin jirteen.

وَأَمَّا الَّذِينَ فَسَقُوا فَمَأْوَاهُمُ النَّارُ كُلَّمَا أَرَادُوا
أَن يَخْرُجُوا مِنْهَا أُعِيدُوا فِيهَا وَقِيلَ لَهُمْ ذُوقُوا عَذَابَ
النَّارِ الَّتِي كُنتُمْ بِهِ تَكذِّبُونَ ﴿٢٠﴾

21. waxaana dhadhansiinaynaa cadaab hoose cadaab wayn kasokow inay noqdaan darteed.

وَلَنَذِقَنَّهُمْ مِنَ الْعَذَابِ الْأَلْوَنِ دُونَ الْعَذَابِ
الْأَكْبَرِ لَمَّا هُمْ فِي حُجْرٍ ﴿٢١﴾

22. yaa ka dulmi badan ruux lagu waaniyay aayaadka Eebihiis oo ka jeedsaday xaggeeda, anaguna dambii-layaasha waan ka aarsanaynaa.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّن دُكِرَ بِعَاقِبَتِ رَبِّهِ ثُمَّ أَعْرَضَ عَنْهَا
إِنَّا مِنَ الْمُجْرِمِينَ مُنتَقِمُونَ ﴿٢٢﴾

Habeenka oo lacibaadaaysto waxay sabab u noqotaa galidda Jannada Eebe, iyadoo Eebe laga cabsan lana rajayn, Xoolahana wax laga bixiyo, kuwaasun wax waynbuu Eebe u darbay. Abuhurayre waxaa laga wariyay in Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi: Eebe wuxuu yidhi: Addoomadayda wanaagsan waxaan u darbay waxaan Ili arkin, Dhagna Maqlin, kuna soo dhicin qalbi Dad. Wuxuuna akhriyay aayadan.

«waxaa sheegay Bukhaari iyo Muslim iyo kuwo kale». Mana sinna Mu'min wanaagsan iyo Faasiq leexday, Mu'minku Jannuu gali, Faasiqana waxaa lagu abaalmarin Naar, waxaana loo soo hormariyaa ciqaabo yar yar ka hor mid wayn bal inay noqdaan. dhabtuna waa inaan cidna ka dulmi bednayn ruux Quraanka lagu waaniyay oo ka jeedsaday, wuxuuna la mid noqon dambiilayaasha Eebe ka aarsado. Qataade wuxuu yidhi: Iska jira ka jeedsashada xuska Eebe, ruuxii ka jeedsada xuskiisa wuxuu kadsoomay kadsoomidda u wayn, wuxuuna is waynsiiyay iswayneysiin daran As-Sajdah (15-22).

23. dhab ahaanbaan u siinny Nabi Muuse Kitaabkii (Tawreed) ee hashakiyiyin la kulankiisa waxaana ka yeellay Kitaabkaas hanuunka Banii Israa'iil.

وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ فَلَا تَكُنْ فِي مَرْيَةِ
مَنْ لَقِيَ رَبَّهُ. وَجَعَلْنَاهُ هُدًى لِّبَنِي إِسْرَائِيلَ ﴿١٣﴾

24. waxaana ka yeelay qaar ka mid ah imaamyo ku hanuuniya amarkannga markay samreen, waxayna ahaayeen kuwa aayaadkannga yaqiniya.

وَجَعَلْنَا مِنْهُمْ أُمَّةً يَهْدُونَ بِأَمْرِنَا لِمَنْ صَبَرْنَا
وَكَأُولَئِكَ آتَيْنَا أُتُوفَاتٍ ﴿١٤﴾

25. Eebahaa baana kala bixin dhexdooda Maalinta Qiyaame waxay ahaayeen kuwo isku diiddan.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ يَتَّصِلُ بَيْنَهُمُ تَوْرَةً فِيمَا
كَأُولَئِكَ يَخْتَالُونَ ﴿١٥﴾

26. miyeyna u caddaannin kuwaasi intaan halaagnay hortood oo quruun ah oy ku dhex socon guryahoodii, taasina waxaa ku sugan calaamado ee miyeyna wax maqlaynin.

أُولَئِكَ يَهْدِي لَهُمْ كَمَا أَهْلَكْنَا مِنْ قَبْلِهِمْ مِنَ
الْقُرُونِ يَسْمُونَ فِي مَسْجِدِهِمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ
لَآيَاتٍ أَفَلَا يَسْمَعُونَ ﴿١٦﴾

27. miyeyna arkeyn inaan u soo kaxayno Biyaha Dhul abaar ah oon markaas ku soo bixinno Beero ay wax ka cunaan Xoolahooda iyo Naftooduba miyeyna wax arkaynin.

أُولَئِكَ يَرَوْنَ أَنَّا نَسْفِقُ الْمَاءَ إِلَى الْأَرْضِ الْجُرُزِ
فَتُخْرِجُ بِهِمْ رَبًّا تَأْكُلُ مِنْهُ أَنْعَامُهُمْ
وَأَنْفُسُهُمْ أَفَلَا يُبْصِرُونَ ﴿١٧﴾

28. waxay dhihi waa goorma kala xukunku haddaad run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَى هَذَا الْفَتْحُ إِنْ كُنْتُمْ
صَادِقِينَ ﴿١٨﴾

29. waxaad dhahdaa maalinta kala xukunka Gaalada ma anfaco Iimaan-koodu lamana sugu.

قُلْ تَوْرَ الْفَتْحِ لَا يَنْفَعُ الَّذِينَ كَفَرُوا إِيْمَانُهُمْ
وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿١٩﴾

30. Ee isaga jeedso oo sug iyana ha sugene.


فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَانظُرْ إِلَيْهِمْ مِنْ نَظِيرُونَ ﴿٢٠﴾

Eebe wuxu sheegay inuu diray Nabi Muuse oo siiyay Kitaabkii Tawreed, Nabigana wuxuu faray inuusan shakiyiyin lakulankiisa, Kitaabkaasuna wuxuu hanuun u ahaa Bani israa'iil oo qaar kamid ah Imaamyo laga dhigay markay toosnaadeen. Eebaana Dadka kala bixin qiyaamada waxay isku diiddanaayeen adduunka, Dadkuna waa inay ku waana qaataan ummadihii ka horreeyey ee la halaagay iyo sida Eebe u nooleeyo dhul dhintay oo abaaroobay uguna soo bixiyo Cunno lagu noolaado. Tan kale

ma habboona in ladadajisto imaatinka Saacadda Qiyaame, Illeen markay timaado Gaal wax uma tarto rumayne, waxayna ku dhammaatay Suuraddu in lala sugo gaalada abaalkooda.

Sufyaan wuxuu yidhi: Saasay noqdeen kuwaasi Kumana haboona ruux inuu noqdo Imaam lagu daydo intuusan adduunyada iska qabannin.

Mar la waydiiyay Sufyaan hadalkii Sayid Cali: Samirku Iimaanka wuxuu u yahay sida Madaxu Jidhka u yahay, wuxuu yidhi: Markay qabsadeen amarka Madixiisii yey noqdeen Madax. As-Sajdah (23-30).



Suurat Al-Axzaab

سُورَةُ الْأَحْزَابِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Nabiyow ka dhawrso (ka yaab) Eebe hana adeecin Gaalada iyo Munaafiqiinta, Eebana waa oge falsan.

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ اتَّقِ اللَّهَ وَلَا تُطِعِ الْكَافِرِينَ
وَالْمُنَافِقِينَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١﴾

2. Raacna waxa lagaaga waxyoon xagga Eebahaa, Eebana waxaad camal falaysaan waa ogyahay.

وَأَتَّبِعْ مَا وَحَىٰ إِلَيْكَ مِنْ رَبِّكَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ
بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿٢﴾

3. Talana Saaro Eebe, Eebaana ku filan wakiile.

وَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ وَكِيلًا ﴿٣﴾

4. Mayeelin Eebe Laba qalbi Ruux Laabtiis, mana yeelin Haweenkiinna aad dihaaraysaanna (ku dhaaranaysaanna) Hooyooyinkiin oo kale, mana yeelin kuwaad sheegateenna Caruurtiinna oo kale, taasi waa hadalka afkiinna uun Eebana wuxuu sheegi xaqa, isagaa-na ku hanuuniya Jidka (toosan).

مَا جَعَلَ اللَّهُ لِرَجُلٍ مِنْ قَلْبَيْنِ فِي جَوْفِهِ وَمَا جَعَلَ
أَزْوَاجَكُمْ أَلْفًا عَلَىٰ أَنْتُمْ تَطْلَهُونَ وَمَنْ هُنَّ أُمَّهَاتُكُمْ
وَمَا جَعَلَ أَدْعِيَاءَكُمْ أَبْنَاءَكُمْ ذَٰلِكُمْ قَوْلُكُمْ
بِأَفْوَاهِكُمْ وَاللَّهُ يَقُولُ الْحَقَّ وَهُوَ يَهْدِي
السَّبِيلَ ﴿٤﴾

5. Ugu yeedha kuwaas Abayaalkood saasaa ku cadaalo badan Eebe agtiise, haddaydaan aqoonnin aabayaalkoodna waa walaalihiinna Diinta iyo Sokeeyihiinna, Korkiinnana dhib ma saarra waxaad ku gaftaan, hasa yeeshee waxay u kasto Quluubtiinnu (yaa laydin waydiin) Eebana waa dambi dhaafe Naxariista.

أَدْعَوْهُمْ لِآبَائِهِمْ هُوَ أَقْسَطُ عِنْدَ اللَّهِ فَإِنْ لَمْ تَعْلَمُوا
ءَابَاءَهُمْ فَلْيَخْرُجُوا مِنَ الدِّينِ وَمَوْلَايَكُمْ وَلَيْسَ
عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ فِيمَا أَخْطَأْتُمْ بِهِ وَلَكِنْ مَا
تَعَمَّدَتْ قُلُوبُكُمْ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَحِيمًا ﴿٥﴾

Suuraddan waxaa lagu magacaabaa Suuratu Axaab, Eebana wuxuu Nabiga Muxamed ah (Ammaan iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u dardaarmay Cabsida Eebe iyo inuusan Adeecin Gaalada iyo Munaafiqiinta, raacana waxa Eebe U waxyooday, talana saarto Eebe isagaa ku filan wixii loo talo saartee. Waxaana jirta inaan Laabu Laba qalbi lahayn. Hawenka lagu sheego inay hooyo lamid yihiinna Hooya ma noqdaan, Caruurtaad sheegataan idin kood dhalinna Ilmihiiini dhabta ahaa ma aha, ee waa in Aabahood loogu yeedho, Haddaydaan aqoonna waa walaalihiinna Diinta Islaamka. Gafna Eebe Dadka uma qabto waxaase loo qabtaa wuxuu qalbigoodu u kaso. Nabigana (Ammaan iyo

Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu hidhi: Eebe sarreeye wuxuu ummadda ka saamaxay gafka, Halmaanka iyo waxa lagu qasbo. Al-Axzaab (1-5).

6. Nabigaa uga Roon (Turid badan) Mu'miniinta Naftooda, haweenkiisuna waa Hooyooyinkood, Qaraabaduna iyagaa qaarkood qaarka kale kaga Mudan Kitaabka Eebe, Mu'miniinta (kale) iyo Muhaajiriinta, inaad wanaag u fashaan gargaarayaashiinna mooyee, Xukunkaasna wuxuu ku Quran yahay Kitaabka.

الْحَيُّ أُولَىٰ بِالْمُؤْمِنِينَ مِنْ أَنْفُسِهِمْ وَأَزْوَاجُهُمْ
أُمَّهَاتُهُمْ وَأُولَ الْأَرْحَامِ بَعْضُهُمْ أَوْلَىٰ بِبَعْضٍ فِي
كِتَابِ اللَّهِ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُهَاجِرِينَ إِلَّا أَنْ
تَفْعَلُوا إِلَىٰ أَوْلِيَآئِكُمْ مَعْرُوفًا كَانَ ذَلِكَ فِي
الْكِتَابِ مَسْطُورًا ﴿٥﴾

7. «Xusuuso» markaan ka qaadnay Nabiyada ballankoodii iyo adiga iyo Nuux, Ibraahim, Muuse iyo Ciise Ibnu Maryam, oo ka qaadnay Ballan adag.

وَإِذْ أَخَذْنَا مِنَ النَّبِيِّينَ مِيثَاقَهُمْ وَمِنْكَ وَمِنْ نُوحٍ
وَإِبْرَاهِيمَ وَمُوسَىٰ وَعِيسَىٰ ابْنِ مَرْيَمَ وَأَخَذْنَا مِنْهُمُ
مِيثَاقًا عَلِيمًا ﴿٧﴾

8. si Eebe u warsado kuwa Runlayaasha ah Runtooda, Gaaladana wuxuu u darbay Cadaab daran.

لَيْسَ لَ الصِّدِّيقِينَ عَنِ صِدْقِهِمْ وَأَعَدَّ لِلْكَافِرِينَ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿٨﴾

9. Kuwa (xaqa) rumeeyow xusuusta Eebe siduu idiinku Nicmeeyey, markay Junuud (Askar) idiin timid markaas oon ku dirnay Dabayl iyo Askar iyadoy aydaan arkayn, Eebana waxaad Camal falaysaan waa arkaa.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا أَذْكُرُوا نِعْمَةَ اللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ
جَاءَتْكُمْ جُنُودٌ فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِيحًا وَجُنُودًا لَمْ
تَرَوْهَا وَكَانَ اللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرًا ﴿٩﴾

10. xusuusta markay idinkaga yimaadeen Kor iyo hoosba, Indhuhuna Iisheen Quluubtuna dhuunta gaadhay Eebana aad u maleyseen malooyin.

إِذْ جَاءَهُمْ كُرُومٌ مِنْ فَوْقِكُمْ وَمِنْ أَسْفَلَ مِنْكُمْ وَإِذْ
رَأَعْتَ الْأَبْصُرَ وَوَلَعْتَ الْأَلْبُوبَ وَأَلْمَأَجِرَ وَتَطَّلَوْنَ
بِاللَّهِ الظُّمُونًا ﴿١٠﴾

Nabiga rumeyntiisa iyo adeeccidiisa yaa Mu'miniinta uga xaq badan Naftooda. Haweenka Nabigana waa Hooyooyinka Mu'miniinta, Qaraabaduna waxay mudan tahay dhawrid. Eebe waxaa kale ooou inoo caddeeyey inuu ballan adag ka qaaday Nabiyadii si ay xaqa u gutaan, siiba Nabi Muxamad, Nuux, Ibraahim, Muuse iyo Ciise, si ruuxa runlaha ah Khayr loogu abaalmaryo loona warsado, Gaaladana loo Ciqaabo, Eebana Mu'miniintii ree Madiino ee Nabigu la noolaa wuxuu xusuusiyeey Dagalkii Xisbiyadu ay dhan kastaba kaga yimaadeen Madiino oo aad loo cabsaday, Indhuhuna taagmeen, Wadnuhuna Dhuunta yimid, Eebana shar laga malaystay markaas Dabayl iyo Col aan la arkayn Gaaladii Eebe ku diray, Mu'miniintiina u gargaaray. Al-Axzaab (6-10).

11. Halkaasaa lagu imtixaamay Mu'miniinta Gilgilid daranna lagu gil gilay.

هَذَا لِكِ ابْتِلَى الْمُؤْمِنُونَ وَذَلَّلُوا زَلْزَلًا أَلْسِنًا لِيَدْعُوا
بِاللَّهِ الظُّمُونًا ﴿١١﴾

12. Markey Munaafiqiintu lahaayeen iyo kuwa Quluubta ka buka Eebe iyo Rasuulkiisu waxaan dhagar ahayn nooma yaboohin.

وَأَذِيقُوا الْمُنَافِقِينَ وَالَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٌ مَّا وَعَدْنَا اللَّهُ وَرَسُولُهُ إِلَّا عُرُوشًا ۝١٢

13. markay qayb ka mid ah lahayd ree Madiinow meel aad ku nagaataan (goobta) dagaalka ma jirto, ee noqda (xagga Madiino), koox iyaga ka mid ahna waxay idan warsan nabiga iyagoo dhihi Guryihiibaa naga dayacnaa, mana dayacna ee waxaan carar ahayn ma rabaan.

وَأَذِيقُوا طَائِفَةٌ مِّنْهُمْ يَا أَهْلَ يَثْرِبَ لَا مُقَامَ لَكُمْ فَارْجِعُوا وَيَسْتَأْذِنُ فَرِيقٌ مِّنْهُمُ النَّبِيَّ يَقُولُونَ إِنَّ بُيُوتَنَا عَوْرَةٌ وَمَا هِيَ بِعَوْرَةٍ إِن يُرِيدُونَ إِلَّا فِرَاقًا ۝١٣

14. Haddii loogu soo galo Magaalada dhan kasto, markaas la warsado Gaal-nimo way la imaan lahaayeen, waxaan wax yar ahaynse kuma dhexnagaadeen.

وَلَوْ دَخَلَتْ عَلَيْهِمْ مِّنْ أَقْطَارِهَا ثُمَّ سَأَلُوا النَّبِيَّ أَنْ يَخْرُجَ مَعَهُمْ لَخَرَّبْتَهُمْ وَإِنْ أَصْبَحُوا بِهَا لَيَسِيرًا ۝١٤

15. Horay waxay ugu ballantameen inayan cararin, Ballanka Eebana waa lays warsan.

وَلَقَدْ كُفِّرْنَا عَنْهُمْ أَسَفًا إِنَّ اللَّهَ مِنْ قَبْلِ لَأَتُوبُونَ إِلَّا الَّذِينَ وَكَانَ عَهْدُ اللَّهِ مَسْئُولًا ۝١٥

16. waxaad dhahdaa carar aad geeri ka carartaan ama dil wax idiinma taro, wax yar waxaan ahayna laydiin ku raaxeyn maayo (adduunka).

فَلَنْ يَنْفَعَكُمْ الْفِرَارُ إِن فَرَرْتُمْ مِنَ الْمَوْتِ أَوِ الْقَتْلِ وَإِذًا لَأَمْتَعُونَ إِلَّا قَلِيلًا ۝١٦

17. dheh yaa idinka ilaalin Eebe hadduu dhib idin la doono, ama naxriis, wax Eebe ka soo hadhay oo sokeeye ama gargaare ahna heli meysaan.

قُلْ مَنْ ذَا الَّذِي يَعْصِمُكُمْ مِنَ اللَّهِ إِنْ أَرَادَ بِكُمْ سُوًّا أَوْ أَرَادَ بِكُمْ رَحْمَةً وَلَا يَجِدُونَ لَهْمُ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا ۝١٧

Sida dhabta ahna waa la imtxaanay Mu'miniinta, kuwii Niyadda ka buhayna waxay muujiyeen munaafaqimo, waxaana ka soo baxay oy ku hadleen in Eebe Iyo Rasuulkiisu Khiyaameen, waxayna ka codsadeen Saaxiibadood inay Goobta Dagaalka iskaga baxaan kuna noqdaan Magaalada Madiino oo Musliimiintu daafacayeen, qaar ka mid ahna Nabigay fasax warsadeen iyagoo sheegi in Guryuhu ka dayacanyihiin, dhab ahaanna waxay dooni Carar, haddii loo soo galo oo Gaalooba ladhahana way-ogolaan, maxayse nolol adduun taraysaa, yaase Eebe ka celin ciddii burisa ballaankiisa, Carar miyaase wax tari, Ciddeese Eebe ka sokow Khayr iyo Dhib kerta, yaase gargaare ah Eebe mooyee. Al-Axzaab (11-17).

18. Dhab ahaan yaa Eebe u ogyahay kuwa reebayaalka ah (ku cabsiinta dagaalka) oo idinka mid ah iyo kuwa

*فَدَعَا اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ مِنْكُمْ وَالْقَائِلِينَ لِإِخْوَانِهِمْ هَلُمَّ إِلَيْنَا وَلَا يَأْتُونَ الْبَأْسَ إِلَّا قَلِيلًا ۝١٨

ku dhaha Walaalahooda (munaafiqiinta ah) noo imaadda, Dagaalkana ma tagaan wax yar mooyee.

19. way idinkala bakhayli (wanaagga) marka cabsi timaadna waxaad arki iyagoo ku soo eegi, indhahooduna wareegi sida mid Geeri hayso, marka cabsidu tagtana waxay idiinkugu Dhibaan Carrabbo afbadan, isagoo idinkala bakhayli khayrka, kuwaasi ma rumeynin (xaqa) waana Hoobiyey Eebe camalkooda, arrintaasuna waa u fududahay Eebe.

20. waxay malayn inayan tagayn Xisbiyadu (colalka) waxayna Jecelyihiin in marka Cololku yimaadaan oy baadiyaha jiraan oy warkiinna warsadaan, hadday idin la joogaanna ma dagaallameen wax yar mooyee.

Jahaadka iyo Difaaca Dalka Islaamka waa Jid adag, mana aha in Dadka la reebo oo cabsi galin iyo Waswaas iyo Balaayo iyo Baasbaa dhacay lagula dhex jiro Muslimiinta, sidii Munaafiqiintii Khayrka la necbayd Mu'miniinta ee Fulayaasha ahaa, indhaha Galka ka rogi jiray sida ruux Sakaraad hayo. marka Nabadda ahna Xan iyo Dhib u Lajooga Mu'miniinta, jeclaana in marka Magaalada Madiino iyo Dhulka Islaamka la soo weerari ay baadiyo ku maqnaadaan, waydiiyaanna warka Muslimiinta, hadday joogaanna wax matareen. Al-Axzaab (18-20).

21. Waxaa idiinku sугan Rasuulka Eebe Kudayasho wanaagsan, ruuxii rajayn Eebe iyo Maalinta Aakhiro, Eebana xusa in Badan.

22. markay Mu'miniintu arkeen Xisbiyadii (colkii) waxay dhaheen kan waa wixii Eebe iyo Rasuulkiisu noogu yaaboheen, runbuu sheegay Eebe iyo Rasuulkiisu, waxaan Iimaan iyo Hoggaansan ahaynna uma siyaadinin.

23. Mu'miniinta waxaa ka mid ah Rag ka rumeeyey waxay Eebe kula ballantameen, waxaana ka mid ah mid Gutay Ballankii (Ajashiisii), waxaana ka mid ah mid sugi, mana ayna badalin badda-

أَشِحَّةً عَلَيْكُمْ فَإِذَا جَاءَ الْخَوْفُ رَأَيْتَهُمْ يُنظُرُونَ إِلَيْكَ تَدُورًا أَعْيُنُهُمْ كَالَّذِي يُغْتَنَىٰ عَلَيْهِ مِنَ الْمَوْتِ ۚ فَإِذَا ذَهَبَ الْخَوْفُ سَلَفُوكُمْ بِأَلْسِنَةٍ حِدَادٍ أَشِحَّةً عَلَى الْخَيْرِ ۗ أُولَٰئِكَ لَمْ يُؤْمِنُوا فَأَحْبَطَ اللَّهُ أَعْمَالَهُمْ ۗ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرًا ﴿٣١﴾

يَحْسَبُونَ الْأَحْزَابَ لَمْ يَذْهَبُوا وَإِن يَأْتِ الْأَحْزَابَ يَوَدُّوْنَ أَلَّا يُنْفِرَ بَادُونَ فِي الْأَعْرَابِ يَسْأَلُونَ عَنْ أُنْبِيَائِكَ وَلَوْ كَانُوا فِيكُمْ مَا قَاتَلُوا إِلَّا أَلْفًا بَلَا ﴿٣٢﴾

لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِّمَن كَانَ يَرْجُوا اللَّهَ وَالْيَوْمَ الْآخِرَ وَذَكَرَ اللَّهَ كَثِيرًا ﴿٣١﴾

وَلَمَّا رَأَى الْمُؤْمِنُونَ الْأَحْزَابَ قَالُوا هَٰذَا مَا وَعَدَنَا اللَّهُ وَرَسُولُهُ، وَصَدَقَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ، وَمَا زَادَهُمْ إِلَّا إِيمَانًا وَتَسْلِيمًا ﴿٣٢﴾

مِنَ الْمُؤْمِنِينَ رِجَالٌ صَدَقُوا مَا عَاهَدُوا اللَّهَ عَلَيْهِ فَمِنْهُمْ مَّن قَضَىٰ نَجْبَهُ وَمِنْهُمْ مَّن يَنْتَظِرُ وَمَا بَدَّلُوا بَدِيلًا ﴿٣٣﴾

lid.

24. in Eebe ka abaal mariyo Runlo-wyaasha Runtooda, oo cadaabana Mu-naafiqiinta, hadduu doono, ama ka toobad aqbalo, Eebana waa dambid-haaf badane Naxariista.

لِيَجْزِيَ اللَّهُ الصَّادِقِينَ بِصِدْقِهِمْ وَيُعَذِّبَ
الْمُنَافِقِينَ إِنْ شَاءَ أَوْ يَتُوبَ عَلَيْهِمْ إِنْ اللَّهُ كَانَ
عُفُورًا رَحِيمًا ﴿٤٤﴾

Waxaa ku waajib ah ruuxa Mu'minka ah inuu ku daydo Rasuulka Eebe Hadalka, Ficilka, Akhlaaqda iyo wax kasta oo wanaag ah, sida samirka, Adkeysiga jahaadka iyo wixii la mid ah, waxayna calaamo u tahay Eebe ka yaabid iyo darbasho Maalinta Qiyaame, ruuxa Mu'minka dhabta ahna waa inuu Rumeeyaa yabooha Eebe iyo Rasuulkiisa, sida caadada Mu'miniinta wa inay ooofiyaan Ballan gaadka Eebe xaataa in xaqa Difaaciisa lagu dhinto, siday faleen Asaxaabtii Nabiga (ammaan iyo Nabdgalayo Eebe korkiisa ha yeelee) si Eebe ruux walba u abaal mariyo Al-AxzAb (21-24).

25. Eebe wuxuu ku celiyey kuwii Gaaloobay cadhadoodii, wax khayr ahna mayna gaadhin, Eebaana ka kaafiyey Mu'miniinta Dagaal, Eebana waa xoogbadane adkaada.

وَرَدَّ اللَّهُ الَّذِينَ كَفَرُوا وَيَعْظِيهِمْ أُولَئِكَ هُمُ الَّذِينَ
وَكَّفَى اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ الْقِتَالَ وَكَانَ اللَّهُ قَوِيًّا
عَزِيزًا ﴿٤٥﴾

26. kuwii u kaalmeeyey ehlu Kitaabkana ahaa wuxuu ka soo dajiyey (ka soo saaray) Dhufaysyadoodii, wuxuuna ku tuuray Quluubtooda argagax, koox ka mid ah waad dilaysaan, Kooxna waa Qafaalanaysaan.

وَأَنْزَلَ الَّذِينَ ظَهَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكُتَيْبِ مِنْ
صَبَاحِهِمْ وَقَدَفَ فِي فُلُوفِهِمُ الرَّعْبَ قَرِيبًا
تَقْتُلُونَ وَتَأْسِرُونَ قَرِيبًا ﴿٤٦﴾

27. wuxuuna idin dhaxalsiiyey Dhulkoodii Guryahoodii iyo xoolahoodii, iyo Dhul aydaan hadda ka hor ku joogsan, Eebana wax kasta wuu karaa.

وَأَوْرَثَكُمُوهُنَّ وَدِينَهُنَّ وَأَمْوَالَهُنَّ وَأَرْضًا لَكُمُ
تَطْفُوها وَكَانَ اللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرًا ﴿٤٧﴾

Eebe wuxuu ka warramay in cadawgii isu soo bahaystay baabi inta Rasuulka iyo Mu'miniinta, Magaalada Madiinana hareereyey ay hungoobeen, lana noqdeen cadhadii iyagoon wax gaysan, Mu'miniintiina Eebe ka kaafiyey Dagaal, iyo inuu Yuhuuddii ku ballan furtay Nabiga iyo Asxaabtiisana laga saaray Dhufaysyadookii wax la laayay iyo wax la qafaashayna laga dhigay, Dhulkay dulmiga la joojeenna loo soo celiyey Mu'miniinta, Ballan jabinta iyo khiyaamadana waa shaqada Yuhuudda, waxaana Yuhuud xukun caadil ah ku xukumay Sacad Binu Macaad. Al-Axzaab (25-27).

28. Nabiyow ku dheh Haweenkaaga haddaad tihiin kuwo dooni Nolosha adduunyo iyo Quruxdeeda kaalaya waan idin gacan marin si quruxsanna idiinsiideyne.

يَتَّيْمِنُهَا النَّبِيُّ قُلْ لَأَرْوِيحُكَ إِنْ كُنْتُمْ تُرِيدُونَ الْحَيَاةَ
الدُّنْيَا وَرِزْقَهَا فَفَعَلْنَا لَيْتَ أَمَتُكُمْ وَأَسْرِحُكُمْ
سَرَّاحًا جَمِيلًا ﴿٤٨﴾

29. Haddaadse tihiiin kuwo dooni Eebe iyo Rasuulkiisa iyo Daartii Aakhiro Eebe wuxuu u darbay Haweenka wanaagga fala oo idinka mid ah ajir wayn.

وَأَنَّ كُنُفُؤَ تَزْوِجَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ وَالَّذِينَ آمَنُوا إِذْ جَاءَهُمْ
اللَّهُ بِأَعْدَادٍ لِّلْمُحْسِنَاتِ مِنكُنَّ أُجْرًا عَظِيمًا ﴿٣١﴾

30. Haweenka Nabigow tiinnii la timaadda xumaan cad waxaa loo laa laabi cadaabka, arrintaasna waa u fududdahay Eebe.

بِنَيْسَاءِ النَّبِيِّ مَن يَأْتِي مِنكُنَّ بِفَحِشَةٍ مَّبِينَةٍ
يُضَعَفُ لَهَا الْمَدَابِقُ يُضَعَّفَنَّ وَكَانَ ذَلِكَ
عَلَى اللَّهِ بَسِيرًا ﴿٣٠﴾

31. Tiise adeecda Eebe iyo Rasuulkiisa oo camal fiican fasha waxaan siinaynaa Labo ajir, waxaana u diyaarinay Rizqi wanaagsan.

* وَمَن يَفْتَنَنَّ مِنكُنَّ لِلَّهِ وَرَسُولِهِ وَتَعْمَلْ صَالِحًا
تُؤْتِيهَا أُجْرًا مَّرْتَيْنٍ وَأَعَدْنَا لَهَا رِزْقًا كَرِيمًا ﴿٣١﴾

Aayadahan waxay waanin Haweenkii Nabiga illeen waa banii aadmiye, wuxuuna Eebe kala doorgaliyey inay dhalanteedka adduunka iyo quruxdiisa iyo Eebe iyo Rsasuulkiisa iyo Daar aakhiro kala doortaan, oo hadday adduunyo rabaan uu Nabigu si quruxsan u siidayn, hadday wanaag falaanna Eebe si fiican ku abaalmarin, tii iyaga ka mid ah oo xumaan cad la timaadana (Eebe waa ka koriyey) si daran loo ciqaabi, tiise Eebe iyo Rasuulkiisa adeecda camal fiicanna fasha Eebe siin ajir badan iyo Khayr. Al-Axzaab (28-31).

32. Haweenka Nabigow ma tihidiin sida Haweenka kale, haddaadse dhowrsataan hadalka ha nuglaynina oo uu damco midka qalbiga ka buka, hadal wanaagsanna ku hadla.

بِنَيْسَاءِ النَّبِيِّ لَسَانًا كَأَحَدٍ مِّنَ النِّسَاءِ إِنِ اتَّقَيْتُنَّ
فَلَا تَخْضَعْنَ بِالْقَوْلِ فَيَطْمَعَ الَّذِي فِي قَلْبِهِ مَرَضٌ
وَقُلْنَ قَوْلًا مَعْرُوفًا ﴿٣٢﴾

33. Kuna sugnaada Guryihiinna, hana u wareegaysannina (idinkooisfaydi) si-dii jaahiliyadii horraysay, Salaaddana ooga, Sakadana bixiya, Eebe iyo Rasuulkiisana adeeca, Eebe wuxuu uun dooni inuu xumaanta idinka tagsiyo (fogeeyo dambiga) Eehelubaytkow, idinna daahiryeelo.

وَقَرْنَ فِي بُيُوتِكُنَّ وَلَا تَبَرَّجْنَ تَبَرُّجَ الْجَاهِلِيَّةِ
الْأُولَىٰ وَأَقِمْنَ الصَّلَاةَ وَآتِينَ الزَّكَاةَ
وَأَطِعْنَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيُذْهِبَ
عَنكُمُ الرِّجْسَ أَهْلَ الْبَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيرًا ﴿٣٣﴾

34. xusuustana waxa lagu aakhrin Guryihiinna oo aayaadka Eebe ah iyo Sunnada (Nabiga), Eebana waa wax walba oge Xeeldheer.

وَأذْكَرْتَ مَا بَيْنِي فِي بُيُوتِكُنَّ مَن
ءَاتَيْتِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ إِنِ اللَّهُ كَانَ
لَطِيفًا خَبِيرًا ﴿٣٤﴾

35. Ragga Muslimiinta ah iyo Haweenka Muslimaadka ah, Ragga Mu'miniinta ah iyo Haweenka Mu'minaadka ah, Ragga Eebe adeeca iyo Haweenka

إِنَّ الْمُسْلِمِينَ وَالْمُسْلِمَاتِ وَالْمُؤْمِنِينَ
وَالْمُؤْمِنَاتِ وَالْقَانِتِينَ وَالْقَانِتَاتِ وَالصَّادِقِينَ

adeeca, Ragga Runlowga ah iyo Haweenka Runloowga ah, Ragga Samra iyo Haweenka Samra, Ragga u khushuuca, Ragga Sadaqaysta iyo Haweenka Sadaqaysta, Ragga Sooma iyo Haweenka Sooma, Ragga isdhawra iyo Haweenka isdhawra, iyo Ragga imbadan Eebe xusa iyo Haweenka imbadan xusa, wuxuu Eebe u darbay Dambi dhaaf iyo ajir weyn.

وَالصَّادِقَاتِ وَالصَّابِرَاتِ وَالصَّالِحَاتِ وَالْحَسَنَاتِ
وَالصَّالِحِينَ وَالْمُتَصَدِّقَاتِ وَالْمُتَصَدِّقِينَ
وَالصَّابِرِينَ وَالصَّابِرِينَ وَالْحَفِظِينَ فُرُوجَهُمْ
وَالْحَفِظَاتِ وَالذَّاكِرَاتِ وَالذَّاكِرِينَ اللَّهُ كَثِيرًا
وَالذَّاكِرَاتِ أَعَدَّ اللَّهُ لَهُمْ مَغْفِرَةً وَأَجْرًا
عَظِيمًا ﴿٣٥﴾

Aayadahan waxay si gaar ah u guubaabin una Hanuunin Haweenkii Nabiga ee Joogay Guriga daahirka ah si Haweenka kale ee Muslimiinta ah ugu daydaan, waxaana loo sheegay inayan la mid ahayn Haweenka kale, kana fogaadaan wareeg iyo hadal nugul oo kuwa jirran waxgaliya ee ay hadal wanaagsan ku hadlaan, ayna isasturaan ooyan noqon sidii Jaahiliyadii hore. Nasiib darro waxaa dhacday Jaahiliyad ka daran tii hore oo qaawisay Haweenkii kana dhigtay badeeco la gado, Jidhkooda ka ganacsada, taasina waxay khatar ku tahay nolasha bini aadmiga, Salaad, Sako, Eebe iyo Rasuulkiisa adeecidna laga helo Si Eebe xumaanta uga dheereeyo iyagoo xusuusan Nicmada Eebe iyo Nabinimada Guryahooda ku sugan iyo Quraanka lagu akhrin, Eebana wuxuu ku abaal marin ajir wayn Muslimiinta, Mu'miniinta dhawrsadayaashaah, Rumeeyayaasha, Samirowyaasha, kuwa khushuuca, kuwa Sadaqaysta, kuwa Sooma kuwa isdhawra iyo kuwa badiya xuska Eebe. Al-Axzaab (32-35).

36. kuma habboona (umana bannaana) nin Mu'min ah iyo Haweenay Mu'minad ah Marka Eebe iyo Rasuulkiisu wax xukumaan Inay khiyaar u yeeshaan amarkooda, ruuxiise caasiya Eebe iyo Rasuulkiisa wuxuu dhumay dhumid Cad.

وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ وَلَا لِمُؤْمِنَةٍ إِذَا قَضَى اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَمْرًا أَنْ يَكُونَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ مِنْ أَمْرِهِمْ وَمَنْ يَعْصِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ ضَلَّ صِلًا مَبِيدًا ﴿٣٦﴾

37. (xusuuso) markaad ku lahayd kii Eebe u Nicmeeyey, adna aad u nicmaysay (Zayd Binu Xeerithah) hayso Haweenaydaada Eebana ka yaab, Naftaadana aad ku Qarinaysay wax Eebe Muujin ood kana cabsanaysid Dadka (xishoonaysid) Eebaana u muta in laga cabsado (lagana xishoodo) markuu Zayd dantiisii ka dhamaystayna (isfureenna) aan kuu guurrinnay si ayan wax dhib ah u ahaannin Mu'miniinta korkooda (hadday guursadaan)

وَإِذْ تَقُولُ لِلَّذِي أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِ وَأَنْعَمْتَ عَلَيْهِ أَمْسِكْ عَلَيْكَ زَوْجَكَ وَاتَّقِ اللَّهَ وَتُخْفَى فِي تَخْفَى مَا اللَّهُ مُبْدِيهِ وَتَخْشَى النَّاسَ وَاللَّهُ أَحَقُّ أَنْ تَخْشَاهُ فَلَمَّا قَضَى زَيْدٌ مِنْهَا وَطَرًا زَوَّجْنَاكَهَا لِكَيْ لَا يَكُونَ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ حَرَجٌ فِي أَنْزَاجِ أَرْوَاحِهِمْ إِذَا قَضَوْا مِنْهُنَّ وَطَرًا وَكَانَ أَمْرُ اللَّهِ مَفْعُولًا ﴿٣٧﴾

Haweenka ay fureen kuway Wiilal ka dhigteen (iyagoon dhalin) amarka Eebana waa kii la Fuliyo.

Aayadda hore waxay caddayn inaan ruuxna u bannaanayn inuu khilaafo waxa Eebe iyo Rasuulkiisu faareen oo xukun ah wax khiyaar iyo door doorasha ahna ayan xaq u lahayn, ruuxii amarka Eebe iyo Rasuulkiisa Caasiya oo khilaafana waa ruux dhumay oo Jidka xaqa ah ka leexday, aayadaha kale waxay ka qisoon in asaxaabi la dhihi jiray Zayd oo Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka wiil yeeshay waqti hore uu guursaday Haweenay la dhihi Jiray Saynab, isna neceen muddo ka dib, markaas uu Nabiga Kala tashaday, Nabiguna faray inuu haysto Xaaskiisa Eebana ka yaabo, hase yeeshee Eebaa Nabiga ku yar canaantay maxaayeelay Eebaa Nabiga tusiyey inuu guursan markay is furaan, si uu caadadii Jaahiliyadda u buriyo, Aayaddana kuma sugno wax warka lagu badiyo, Eebana wuxuu doono yuu xukumaa oo falaa, waxaana waajib ah inaan rumeyno.

Caa'isha waxaa laga wariyey (Eebe haka raalli noqdee) Inay tidhi: Hadduu Nabigu (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa Hayelee) wax loo waxyooday qarinqarinqar in wuxuu arin lahaa aayaddan.

Al-Axzaab (36-37).

38. Nabiga korkiisa dhib ma aha waxa Eebe u Banneeyey, waana Jidkii Eebe ee Dadkii tagay ee hore amarka Eebana waa qadar Xukuman.

مَا كَانَ عَلَى النَّبِيِّ مِنْ حَرَجٍ فِيمَا فَرَضَ اللَّهُ لَهُ سِنَّةً
اللَّهِ فِي الَّذِينَ خَلَوْا مِنْ قَبْلُ وَكَانَ أَمْرُ اللَّهِ قَدَرًا
مَقْدُورًا ﴿٣٨﴾

39. (waxaa ammaan mudan) kuwa gaadhsiya (Dadka) Farriimaha Eebe, kana cabsada Eebe, oon kana cabsan Axad ka soo hadhay, Eebaana ku filan, Xisaabiye (Kaalmayn).

الَّذِينَ يُبْتَغُونَ رِسَالَتِ اللَّهِ وَيَخْشَوْنَهُ وَلَا يَخْشَوْنَ
أَحَدًا إِلَّا اللَّهَ وَكَانَ بِاللَّهِ حَسِيبًا ﴿٣٩﴾

40. ma aha (Nabiga) Muxamad ah aabaha Ruux ragiinna ka mid ah, laakiin waa Rasuulkii Eebe iyo Khatimiddii Nabiyada, Eebana wax walba waa ogyahay.

مَا كَانَ مُحَمَّدٌ أَبَا أَحَدٍ مِنْ رِجَالِكُمْ وَلَكِنْ رَسُولَ
اللَّهِ وَخَاتَمَ النَّبِيِّينَ وَكَانَ اللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمًا ﴿٤٠﴾

41. kuwa xaqa rumeeyow xusa Eebe wax badan.

يَتَّبِعُهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَذْكُرُوا اللَّهَ ذَكَرًا كَثِيرًا ﴿٤١﴾

42. Weyneeyana Aroortii iyo Galabtii.

وَسَبِّحْهُ بُكْرَةً وَأَصِيلًا ﴿٤٢﴾

43. Eebana waa kan idiin naxariista Malaa'igtiisuna idiin ducayso, si uu idiin ka bixiyo Mugdiyaasha idiin kuna bixiyo Nuurka, waana kan u Naxariista Mu'miniinta.

هُوَ الَّذِي يُصَلِّي عَلَيْكُمْ وَمَلَائِكَتُهُ لِيُخْرِجَكُم
مِنَ الظُّلُمَاتِ إِلَى النُّورِ وَكَانَ بِالْمُؤْمِنِينَ رَحِيمًا ﴿٤٣﴾

44. Bariidadoodu Maalintay Eebe la kulmi waa Salaan, wuxuuna u darbay ajir weyn.

يَجْتَنِبُهُ قَوْمٌ يَبْقَوْنَهُ وَرَأَتُهُ وَاعْتَدَ لَهُمْ أَجْرًا كَرِيمًا ﴿٤٤﴾

Wax Eebe xalaaleeyey Nabiga wax kama saarra, illeen amarka isagaa iska leh, hor iyo Dibbee, waxaana ammaan mudan kuwa farrinta xaqa ah ee Eebe gaadhsiiya Dadka, kana yaaba Eebe kaliya, wax ka soo hadhayna aan ka cabsanayn, Eebana ku filan wakiil gargaarah' oo xisaabiy, tan kale waxay sheegi Aayadda Afartanaad inuusan Nabigu Aabo u ahayn Ragga ee u yahay Rasuulkii Eebe ee lagu khatimay Nabiyada, Eebana wax walba waa daalacdaa, waase in xuska Eebe la badiyaa Wakhti kasta, si Eebe noogu naxariisto Malaa' igtuna noogu ducayso, Nuurna u hello mugdigana uga baxno, Maalintaan la kulannana uu inoo naxariisto Nabad galyo iyo Ajir waynaa inoo siiyo. Al-Axzaab (38-44).

45. Nabiyow waxaannu ku dirray adoo marag ah, oo bishaarayn oo digi.

يَتَأْتِيهَا النَّبِيُّ إِنَّا أَرْسَلْنَاكَ شَاهِدًا وَمُنِيرًا
وَتَذِيرًا ﴿٤٥﴾

46. oo Dadka Eebe ugu yeedhi Idankiisa, oo siraad ifi ah.

وَدَاعِبًا إِلَى اللَّهِ بِآيَاتِهِ وَسِرَاجًا مُنِيرًا ﴿٤٦﴾

47. ee u bishaaree Mu'miniinta inay xagga Eebe ku leeyihiin fadli (dheeraad) weyn.

وَيَسِّرَ الْمُؤْمِنِينَ بِأَنَّهُمْ مِنَ اللَّهِ فَضْلًا
كَبِيرًا ﴿٤٧﴾

48. hana adeecin Gaalada iyo Munaafiqiinta, dhibkooda iska gudub (hana u aabayaelin) Eebana talo Saaro isagaa ku filan wakiile.

وَلَا تَطْعَمِ الْكٰفِرِينَ وَالْمُنٰفِقِينَ وَدَخِ اٰذٰنَهُمْ
وَتَوَكَّلْ عَلَى اللّٰهِ وَكَفَىٰ بِاللّٰهِ وَكِيلًا ﴿٤٨﴾

Eebeheen wuxuu u diray Dadka dhammaantiis Nabiga Muxamed ah (Ammaan iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) isagoo marag ah oo u bishaarayn Mu'miniinta una digi gaalada, xaqana Dadka ugu yeedhi, Isagoo Nuur cad oon mugdi ku jirin ah, Eebana wuxuu faray inuu u sheego Mu'miniinta wanaagga Eebe u darbay iyo inuusan gaalada iyo Munaafiqiinta warkooda adeecin, isagana jeedsado, Eebana talo saarto, illeen isagaa ku filan talo saarashee.

Cadaa, Binuu Yasaar waxaa laga wariyey inuu yidhi: Waxaan la kulmay Cabdullaahi Binu camar Binu Caas, waxaana idhi Iiga warran tilmaanta Nabiga (ammaan iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Tawreed dhexdeeda, wuxuuna yidhi: Eebaan ku dhaartaye wuxuu ku tilmaamanyahay Tawreed Tilmaamihiisa Quraanka qaarkood. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Markay soo dagtay aayadda (Nabiyoow annagaa ku dirray adoo marag ah..) oo uu ahaa Nabiguna kii faray Cali iyo Macaad (Eebe ha raalli noqdee) inay aadaan Yaman yaa wuxuu ku yidhi (ammaan iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): Taga Bishaareeyana, hana eryina, Fududeeyana hana adkyenina waxaa laygu soo dajiyay (Aayaddane). Waxaa wariyey Ibnu Abiixaatim iyo Dabaraani. Al-Axzaab. (45-48).

49. Kuwa (xaqa) rumeeyow hadaad guursataan Haween mu'minaad ah markaas aad furtaan taabasho horteed, wax cidda ah kuma lihidin korkooda oy tirsan, ee gacan mariya una sii daaya si quruxsan.

يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا نَكَحْتُمُ الْمُؤْمِنَاتِ ثُمَّ
طَلَقْتُمُوهُنَّ مِنْ قَبْلِ أَنْ تَمْسُوهُنَّ فَمَا لَكُمْ
عَلَيْهِنَّ مِنْ عَدْوٍ تَعْتَدُوْنَ لَهَا فَمَتَّعُوهُنَّ وَسِرَّجُوهُنَّ
سِرَاحًا جَمِيلًا ﴿٤٩﴾

50. Nabiyow waxaan kuu bannaynay Haweenkaaga aad siisay meherkoodii iyo waxaad hanatay (Xagga gaalada) oo Eebe kugu soo celiyey, iyo Gabdha-

يَتَأْتِيهَا النَّبِيُّ إِنَّا أَحْلَلْنَا لَكَ أَنْزَوْجَكَ الَّتِيءَ اتَّيْتِ
أُجُورَهُنَّ وَمَا مَلَكَتْ يَمِينُكَ مِمَّا أَفَاءَ اللَّهُ
عَلَيْكَ وَبَنَاتِ عَمِكَ وَبَنَاتِ عَمَّتِكَ وَبَنَاتِ

ha Adeerkaa, Gabdhaha Eedadaa, Gabdhaha Abtiyadaa, Gabdhaha Habar yaraha oo kula soo hijrooday, iyo Haweenay Mu'minad ah hadday Naf-teeda Nabiga u hibayso, hadduu doono inuu guursado Nabigu, iyadoo gaar kugu tahay Mu'miniinta ka sokow, waan ognahay waxaan ku faralyeellay Mu'miniinta xagga Haweenkooda, iyo waxa gacantoodu hanato, si aan kor-kaaga dhib u ahaan, Eebana waa dambi dhaafe Naxariista.

حَالِكٍ وَيَبَأٍ خَالِكِ أَلْتِي هَاجِرَ مَعَكَ
وَأَمْرَةَ مُؤْمِنَةٍ إِنْ وَهَبْتَ نَفْسَهَا لِلنَّبِيِّ إِنْ أَرَادَ
النَّبِيُّ أَنْ يَسْتَكْبِرَ بِهَا خَالِصَةً لَكَ مِنْ دُونِ
الْمُؤْمِنِينَ قَدْ عَلِمْنَا مَا فَرَضْنَا عَلَيْهِنَّ فِي
أَزْوَاجِهِمْ وَمَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُمْ لِيَكُونَ
يَكُونَ عَلَيْكَ حَرَجٌ وَكَانَ اللَّهُ
عَفُورًا رَحِيمًا ﴿٥١﴾

Aayadahan waxay ka warrami xagga Guurka, iyo Furidda iyo inaan Haweenay la furay taabasho horteed wax cidda ah korkeeda ahayn, tan kale waxay caddayn waxyaalaha guurka ku saabsan oo Eebe u banneeyey Nabiga (ammaan iyo Nabadaglyo korkiisa Eebe hayelee) iyo Mu'miniiniintaba, wax Nabiga ku Gaar ah iyo wax guud ahaaneedba, iyo in meherku yahay lagama maarmaan, siduu Nabigu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) dayday Kaatun Bir ahna ha ahaatee (Meher) kuwana wuxuu isugu guuriyey inuu Quraanka baro, taasina waa xurmeynta Haweenka iyo qaddarintooda. Al-Axzaab (49-50).

51. Waad dib dhigi taad doonto, waadna soo dhaweyn taad doonto oo ka mid ah, kuwaad doonto inaad soo ceshato oo ka mid ah kuwaad ka fogaatay dhib korkaaga ma aha inaad soo ceshato.

* تُرْجَى مَنْ نَشَأَ مِنْهُنَّ وَقُوَى إِلَيْكَ مَنْ نَشَأَ وَمَنْ
أَبْتَغَيْتَ مِمَّنْ عَزَلْتَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكَ ذَلِكَ أَدْنَى
أَنْ تَقْرَأَ أَعْيُنُهُنَّ وَلَا تَحْزَنْ وَيَرْضَيْنَ بِمَا
ءَاتَيْنَهُنَّ كُلُّهُنَّ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا فِي قُلُوبِكُمْ
وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا حَلِيمًا ﴿٥١﴾

Saasaana u dhaw inay indhadoodu qabowsadaan ooyan murugoon oy raalli ku noqdaan waxaad siisay dhammaantood, Eebana waa ogyahay waxa Quluubtiinna ku sugan, Eebana waa oge Dulqaad leh.

52. kuuma bannaana Nabiyow Haweenka (kale) mar dambe iyo inaad Haween kale ku badasho si kasta ood ula yaabto Quruxdooda waxaad hanato mooyee (oo Gaalo laga helo) Eebana wax walba waa ilaaliye.

لَا يَحِلُّ لَكَ الْبَيْتَاءُ مِنْ بَعْدِ وَلَا أَنْ تَبَدَّلَ بِهِنَّ
مِنْ أَزْوَاجٍ وَلَوْ أَعْجَبَكَ حُسْنُهُنَّ إِلَّا مَا مَلَكَتْ
يَمِينُكَ وَكَانَ اللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ رَقِيبًا ﴿٥٢﴾

Aayadahan waxay ka warrami Nabiga (ammaan iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) iyo Haweenkiisii, iyo inay Nabiga u bannaanayd inuu siduu rabo ulanoolaado Haweenkiisa, si iyaguna ayna u murgin, una raalli noqdaan, Eebana wuu daalacan waxa Quluubta ku sugan. Wuxuuna Eebe ku abaalmariyey Haweenkii Nabiga inayna Nabiga u bannaanayn Guur Haween kale, iyo inuu furo

Haweenkiisa oo kuwo kale ku baddalo, maxaa yeelay Imtixaanbay soo mareen kana gudbeen waxayna noqdeen Hooyooyinkii Mu'miniinta, saasna waxaa qaba Ibnu Cabbaas, Mujaahid, Daxaak, Qataade, Xasan, Ibnu Jarir iyo Culimo kale oo badan. Al-Axzaab (51-52).

53. kuwa (xaqa) rumeeyow ha galina Guryaha Nabiga in cunno leydiinku Idmo (yeedho) mooyee idinkoon sugayn Bislaadkiisa, hasayeeshee marka laydiin yeedho gala, markaad cuntaana socda hanasugina sheeko, Illeen taasi waxay dhibi Nabigee wuuna idinka xishoone Eebese xaqa kama xishoodoh, haddaad wax warsataan Haweenka (Nabigana) ka warsada Xijaab gadaashiis. saasaa u daahirnimo badan (u fiican) Quluubtiina iyo Quluubtoodaba, xaqa uma lihidin inaad dhibtaan Rasuulka Eebe ama aad Guursataan Haweenkiisa Gadaashiis waligeed, arrintaasuna way ku wayn tahay Eebe agtiisa.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَاتَدْخُلْنَ عَلَيْنَّ إِلَىٰ أَنْ يُؤْذَنَ لَكُنَّ إِلَىٰ طَعَامٍ غَيْرَ نَظِيرِ بْنِ إِلَهَةٍ وَلَكِنْ إِذَا دُعِيْتُمْ فَادْخُلُوا فَإِذَا طَعِمْتُمْ فَانْتَشِرُوا وَلَا مُسْتَقْبِلِينَ لِحَدِيثٍ إِنْ ذَاكَ كَانَ يُؤْذَىٰ النَّبِيَّ فَيَسْتَعِجُ مِنْكُمْ وَاللَّهُ لَا يَسْتَعِجُ مِنَ النَّبِيِّ وَإِذًا مَأْسُومِينَ مَتَاعًا فَمَسْئُومِينَ مِنْ وِرَاءِ حِجَابٍ ذَاكَ أَطَهَرُ لِلشُّرَكَاءِ وَقُلُوبِهِمْ وَمَا كَانَ لَكُمْ أَنْ تُؤْذُوا رَسُولَ اللَّهِ وَلَا أَنْ تُنْكِرُوا آيَاتِهِ مِنْ بَعْدِهِ ؕ إِنَّ ذَاكَ كَانَ عِنْدَ اللَّهِ عَظِيمًا ﴿٥١﴾

54. Haddaad muujisaan wax ama qariisaan Eebe waa wax kaste oge.

إِنْ تُبْدُوا شَيْئًا أَوْ تَخْفَوْهُ فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمًا ﴿٥٢﴾

55. Korkooda (Haweenka) dhib kama Saarra Aabayaalkood, Wiilashooda, Walaalahood, Wiilasha Walaalahood, Wiilasha Walaashood, Haweenkooda (Mu'miniinta ah) iyo waxay hanatay Gacmahoodu, kana dhawrasada Eebe, Eebe wax kasta wuxuu u yahay Marage.

لَأَجْنَاحَ عَلَيْهِنَّ فِي ءَأْتَابِهِنَّ وَلَا أَبْنَاءِهِنَّ وَلَا إِخْوَانِهِنَّ وَلَا أَبْنَاءَ إِخْوَانِهِنَّ وَلَا نِسَاءِهِنَّ وَلَا مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُنَّ وَأَتَقِدَّتْ اللَّهُ إِنْ اللَّهُ كَانَ عَلَىٰ شَيْءٍ شَهِيدًا ﴿٥٣﴾

Ma haboona in guriga Nabiga (ammaan iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Lays ka galo Idan la'aan iyo isagoon cunto laysugu yeedhin, aadaabtuna waa in marka marti qaadku dhammaado loo fududeeyo Dadka Guriga een sheeko la wadin Gaar ahaan waxaa lagu sii adkeeyey Guryihii Nabiga ee waxyigu ku soo dagayay, Nabiguna uu ka xishoonayay bixinta, Eebese xaqa ka ma xishoodo, waxaana Asluub fiican ah in marka Haweenka la warsan alaah iyo wax lamid ah laga warsado meel asturan gadaasheed iyo xushmad sidii Hweenkii Nabiga Eebe ku caddeeyey saasaana qalbiga uroon mana bannaana in Rasuulka Eebe la dhibo ama Haweenkiisii La guursado Gadaashiis, maxaayeclay waa arrin ku wayn Eebe agtiisa, Eebana wax kasta waa ogyahay, hasa yeeshee Haweenka Dhib kama Saarra ragga aan u bannaanayn inay guursadaan weligood sida Aabbe, Wiilkeeda, Walaalkeed iyo wixii lamid ah sidoo kale Haweenka Mu'miniinta ah ee sharfta leh.

Rasuulkuna (ammaan iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Haddii la iigu yeedho Cudud waan ajiibi, haddii la iihadiyeeyo Mijinna waan aqbali, ee markaad faaruqdaan wixii laydiin ku yeedhay ka fududeeya Qoyska Guriga leh una kala taga Dhulka. Wataas asluubta iyo sharafta Islaamku. Al-Axzaab (53-55).

56. Eebe iyo Malaa' igtiisu waxay ku sallin (ammaani) Nabiga, ee kuwa (xaqa) rumeeyow ku Salliya korkiisa oo salaama Salaan.

إِنَّ اللَّهَ وَمَلَائِكَتَهُ يُصَلُّونَ عَلَى النَّبِيِّ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا صَلُّوا عَلَيْهِ وَسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴿٥٦﴾

57. kuwa dhiba Eebe iyo Rasuulkiisa wuu lacnaday Eebe Adduun iyo Aakhi- roba, wuxuuna u darbay cadaab wax dulleeya.

إِنَّ الَّذِينَ يُؤْذُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ لَعَنَهُمُ اللَّهُ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَأَعَدَّ لَهُمْ عَذَابًا مُهِمًّا ﴿٥٧﴾

58. Kuwa ku dhiba Mu'miniinta Rag iyo Haweenba waxayan kasbannin waxay xambaarteen Been abuurasho iyo Dambi cad.

وَالَّذِينَ يُؤْذُونَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ بَعْدِ مَا كَانَتْ سُبُورًا فَقَدْ احْتَمَلُوا بُهْتَانًا وَإِثْمًا مُّبِينًا ﴿٥٨﴾

59. Nabiyow ku dheh Haweenkaaga iyo Gabdhahaada iyo Haweenka Mu'mi- niinta isku dada Shukadiinna, taasaa idiinku dhaw in laydin aqoonsado oon laydin dhibine, Eebana waa dambi dhaafe Naxariista ah.

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ قُلْ لَأَزْوَاجِكَ وَبَنَاتِكَ وَنِسَاءَ الْمُؤْمِنِينَ يُدْبِرْنَ عَنْهُمْ مِنْ جَلْبِيبٍ ذَلِكَ أَدْرَأُ أَنْ يَعْزُبَ عَنْهُمُ اللَّهُ وَكَانَ اللَّهُ عَاقِرًا رَجِيمًا ﴿٥٩﴾

60. haddayna ka joogin Munaafiqiintu iyo kuwa qalbiga ka buka iyo kuwa Gilgili (Beenta ku faafin) madiino waannu kugu diri kulamana Darsayaan wax yar mooyee.

*أَلَيْسَ لَوْ رَتَبَهُ الْمُتَنَفِقُونَ وَالَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٌ وَالْمُرْجِفُونَ فِي الْمَدِينَةِ لَنُغْرِيَنَّكَ بِهِمْ ثُمَّ لَا يُجَاوِرُونَكَ فِيهَا إِلَّا قَلِيلًا ﴿٦٠﴾

61. Waana la lacnaday meelkastooy joogaanba, hana la qabto oo la dilo Dilmo.

مَلْعُونِينَ أَيْنَمَا ثَقِفُوا أَخْدَانَهُمْ وَقَاتِلُوا ثَغْيَيْكَ ﴿٦١﴾

62. waana sunnadii Eebe dadkii horee tagay wax badalina uma heshid Sunna- da Eebe.

سُنَّةَ اللَّهِ فِي الَّذِينَ خَلَوْا مِنْ قَبْلُ وَلَنْ تَجِدَ لِسُنَّةِ اللَّهِ تَبْدِيلًا ﴿٦٢﴾

Salliga Eebe waa ammaan iyo Naxariis, kan Malaaigtuna Waa duco iyo Dambi dhaaf warsasho sida Dadka, aayadduna wuxuu ku faray Eebe Dadka inay ku Salliyaan Nabiga. Salaadda dhexdedda, iyo markii la xuso, iyo khudbadahana waaba waajib Salligu. Fadli badan baana ku soo arooray xaalkooda oo ka midyahay in Nabigu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): Kan iigu mudan Dadka Maalinta Qiyaame waa kan ugu badan salligayga.

Aayadaha kalana waxay cadayn in kuwa Eebe hadal xun ku dhiba iyo Rasuulkiisa xaqana ka leexda, Mu'miniintana dhiba Dambi la'aan ay mudan Lacanad adduun iyo mid aakhiraba, ay xambaarsadeen abuurasho iyo dambi. Haweenkii Nabiga iyo Gabdhihiisii iyo Haweenka Mu'miniinta oo dhan waxaa la faray inay is asturaan, si loo aqoonsado inay sharafleeyihiin oon loo dhibin.

Mana habboona waana Munaafiqnimo lacanad lagu muto iyo qabasho iyo Dilba in lala dhex ordo Magaalooyinka Muslimka wax muslimka dhibi oo warbeen ah iyo Dacaaqad ah, wataas akhlaaqda islaamku iyo Dhaqankiisa Dhabta ah. Al-Axzaab (56-62).

63. Dadku waxay ku warsan Nabiyow Saacadda (Qiyaame), waxaad dhahdaa Cilmigeedu wuxuu jiraa Eebe agtiis, miyaadse ogtahay inay suuroowdo inay Saacaddu dhawdahay.

يَسْأَلُكَ النَّاسُ عَنِ السَّاعَةِ قُلْ إِنَّمَا عِنْدَ اللَّهِ
وَمَا يُدْرِكُ لَعَلَّ السَّاعَةَ تَكُونُ قَرِيبًا ﴿٦٣﴾

64. Eebe wuxuu Lacnaday Gaalada wuxuuna u darbay (Naarta) Saciir.

إِنَّ اللَّهَ لَعَنَ الْكُفْرِينَ وَأَعَدَّ لَهُمْ سَعِيرًا ﴿٦٤﴾

65. Iyagoo ku waari dhexdeeda wali-good oon helaynna Sokeeye jecel iyo gargaare midna.

خَلِيلِينَ فِيهَا أَبَدًا لَا يَجِدُونَ فِيهَا وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا ﴿٦٥﴾

66. Maalinta lagu gagadin Wajigooda Naarta waxay dhihi waan halaagsanaye haddaan Adeecno Eebe oon Adeecno Rasuulkii.

يَوْمَ تَقُفُّ أَرْجُلُهُمْ فِي النَّارِ يَتَّبِعُونَ يَلَيْتَنَّا أَطَعْنَا
اللَّهَ وَأَطَعْنَا الرَّسُولَ ﴿٦٦﴾

67. Waxayna dhihi Eebow waxaan Adeecnay Madaxdannadii iyo kuwii noo waaweynaa, waxayna naga dhu-miyeen Jidkii.

وَقَالُوا رَبَّنَا إِنَّا أَطَعْنَا سَادَتَنَا وَكِبَرَاءَنَا
فَأَصْبَحْنَا السَّيْلَى ﴿٦٧﴾

68. Ee Eebow Sii kuwaas Laban laab Cadaab Lacanadwaynna Lacnad.

رَبَّنَا إِنَّهُمْ جُفِعُوا مِنَ الْعَذَابِ وَالْعَنْهُمْ
عَنَّا كِبْرًا ﴿٦٨﴾

Sida Aayado badanba sheegeen Saacadda Qiyaame markey dhici Eebe unbaa og, inay dhawdahayna waa suuroowdaa, waana sugantahay, illeen wixii kugu soo socdaba waa dhawyahay, waxaase loo baahanyahay in loo darbado, Macnase kuma jiro in la warsado goortay imaan. Gaalana Eebe wuu lacnaday Ciqaab daranna wuu u darbay iyagoo kuwaari waligood, waxayna ku calaalci inay Khasaareen markay Maqleen warkii Madaxdoodii jidka xaqa ah ka leexisay, iyagoo warsan Eebe in kuwaas Lacnadi ku dhaco Cadaabkana loo laab laabo. Taasina waxay ku tusin Xumaanta Saaxiibka qalloocsan iyo war xun oo la maqlo inay Sabab u tahay Ciqaab daran iyo Halaag ee waa in laga digtoonaado, wanaagana laysku raaco laguna Saaxiibo, Xumaantana laga tago lays kuna maqlin, laguna Saaxiibin, illeen waa luggooyee. Al-Axzaab (63-68).

69. Kuwa (xaqa) rumeeyow hanoqoni-na sidii kuwii dhibay (Nabi) Muuse oo Eebe ka bariyeelay waxay (ku) sheegeen, Eebe agtiisana wuxuu ku leeyahay Waji (Sharaf).

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَتَكَبَّرُوا كَالَّذِينَ ءَادُوا وَمُوسَى
قَبْرَاهُ اللَّهُ مَعَآ قَالُوا وَكَانَ عِنْدَ اللَّهِ وَجِيهًا ﴿٦٩﴾

70. kuwa (xaqa) rumeeyoow ka dhawrsada Eebe hadal toosanna ku hadla.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَكُفُّوا أَقْوَابَ سَيْدِكُمْ ﴿٧٠﴾

71. Haydiin wanaajiyo Camalkiinna hana idiin dhaafo Dambigiinne, Ruu-

يُصَلِّحْ لَكُمْ أَعْمَالَكُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَمَنْ يُطِيعِ

xii Adeeca Eebe iyo Rasuulkiisa wuxuu u liibaanay dhab ahaan Liibaan weyn.

اللَّهُ وَرَسُولُهُ، فَقَدْ فَازَ فَوْزًا عَظِيمًا ﴿٧٦﴾

72. Annagaa u bandhignay Ammaanadda (Cibaadada) Samooyinka, Dhulka iyo Buuraha wayna diideen inay Xambaaraan wayna ka Cabsadeen xaggeeda, waxaase xambaraaray Dadka, wuxuuna noqday Dulmi badane Jahli badan.

إِنَّا عَرَضْنَا الْأَمَانَةَ عَلَى السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ
وَالْجِبَالِ فَأَبَيْنَ أَنْ يَحْمِلْنَهَا وَأَشْفَقْنَ مِنْهَا وَحَمَلَهَا
الْإِنْسَانُ إِنَّهُ كَانَ ظَلُومًا جَهُولًا ﴿٧٧﴾

73. Si Eebe u cadaabo Munaafiqiinta Rag iyo Haweenba iyo Mushrikiinta (Gaalada) Rag iyo Haweenba, uu kana toobad aqbalu Mu'miniinta Rag iyo Haweenba, Eebana waa dambidhaafe Naxariista.

يَعَذِّبُ اللَّهُ الْمُنَافِقِينَ وَالْمُنَافِقَاتِ وَالْمُشْرِكِينَ
وَالْمُشْرِكَاتِ وَيَتُوبُ اللَّهُ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ
وَالْمُؤْمِنَاتِ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَحِيمًا ﴿٧٨﴾

Waxaa habboon inaan dhibaa la noqonin sidii Gaaladii Dhibtay Nabi Muuse Markuu xishood iyo Sharaf kula dhexnoolaa, Eebana ka fogeeyey Kana Bari yeelay waxay ku sheegeen, Sharafna Eebe agtiisa ugu yeelay. Waana in Eebe laga yaabo hadal run ah oo xaq ahna lagu hadlo si Eebe Dambigeenna u dhaafo, markaadeecno Eebe iyo Rasuulkiisana aan u liibaanno Liibaan wayn. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Ruuxii Jecel inuu noqdo kan ugu sharaf badan Eebe Haka yaabo. Hadalka toosanna waa runta iyo xaq. Eebana wuxuu u bandhigay Cirka, Dhulka iyo Buurahaba inay qaadaan Ammaano, taasoo ah Cibaadada iyo waxa lays faray iyo waxa layska reebay wayse ka cudur daarteen kana Cabsadeen, waxaase xambaaray Dad oo Dulmi iyo Jahli ku dheehan si Munaafiqiinta iyo Gaalada loo cadaabo Mu'miniintana looga toobad aqbalu, looguna dambi dhaafo. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Afar Haddaad haysato wax kaama taro wixii kaataga oo adduun ah, Ilaalinta ammaanada, Runta Sheekada, Fiicnida Dabecada iyo Xalaal nimada cunnada.

«Wxaa wariyey Imaam Axmed». Al-Axzaab (69-73).



Suurat Saba'

سُبْحَانَكَ
يَا كَرِيمُ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. mahad Eebaa Iska leh ay awooddiisa kujiraan waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, mahadna isagaa muta aakharo iyo adduunba, waana falsame xeel dheer (waxwalba oge).

2. wuxuuna ogyahay waxa dhulka gali iyo waxa ka soobixi iyo waxa ka soodagi samada iyo waxa u kori, waana naxariiste dambidhaafa ah.

3. kuwii gaaloobay waxay dhaheen nooma imaaneyso saacadda (Qiyaame), waxaad dhahdaa saas ma aha ee Eebahay baan ku dhaartey way idiin imaan, Eebahay waa wax maqan oge, wax darro la egna kagama qarsoona samooyinka iyo dhulka dhexdooda iyo wax waxaas ka yar iyo wax ka weyn midna, wax walbana kitaab cad bey ku sugan yihiin.

4. Si Eebe u abaal mariyo kuwa rumeeyey (xaqa) oo camal fiican Falay kuwaasna waxay mudan dambi dhaaf iyo risqi wanaagsan.

5. Kuwa u socda iney aayaadkanaga (ka leexdaan) iyagoo u maleyn iney daalin (Eebe) kuwaasi waxay mudan cadaab daran oo xun.

6. Waxey arki kuwii cilmiga la siiyeyna (mu'miniinta) in waxa laga soo dajiyey xagga Eebe xaq yahey kuna hanuunin jidka Eebaha adkaada ee la mahdiyo.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ
وَلَهُ الْحَمْدُ فِي الْآخِرَةِ وَهُوَ الْحَكِيمُ الْغَنِيُّ ۝

يَعْلَمُ مَا يَلِجُ فِي الْأَرْضِ وَمَا يَخْرُجُ مِنْهَا وَمَا يَنْزِلُ مِنَ
السَّمَاءِ وَمَا يَتَّبِعُ فِيهَا وَهُوَ الرَّحِيمُ الْعَلِيمُ ۝

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لَا تَأْتِينَا السَّاعَةُ قُلْ سَلِّ وَرَبِّي
لَتَأْتِيَ كُنُوزٌ عَلَيْهِمُ الْعَذَابُ لَا يَحْزَنُ عَنْهُ شَقَالٌ ذَرَبُوا
فِي السَّمَوَاتِ وَلَا فِي الْأَرْضِ وَلَا أَصْقَرُوا ذَلِكَ
وَلَا أَكْبَرُوا لَافِي كِتَابٍ مُبِينٍ ۝

لَيَجْزِيَنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ
أُولَئِكَ لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ۝

وَالَّذِينَ سَعَوْا فِي آيَاتِنَا مُعْجِزِينَ أُولَئِكَ لَهُمْ
عَذَابٌ مِّن رَّجْزِ أَلِيمٍ ۝

وَيَرَى الَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ الَّذِي أُنزِلَ إِلَيْكَ مِنْ
رَبِّكَ هُوَ الْحَقُّ وَيَهْدِي إِلَى صِرَاطٍ الْعَزِيمِ
الْحَمِيدِ ۝

Aayadahanu waxay caddeyn in Eebaha cirka iyo dhulka waxa ku sugan xukuma ee maamula oo aakharo iyo aduunba iska leh ay mahadi u sugnaatey, wax kasta oo aduunka ka dhicina uu ogyahay, gaaladuse waxey diidi saacadda qiyaame iyo xaqa, wuuse keeni Eebaha wax walba og si uu u abaal mariyo kuwa wanaaga faley iyo gaaladaba mid walba camalkiis, kuwa xaqa rumeeyeyse oo cilmiga la siiyey waxey ogyihiin in quraanku xaq yahey kuna hanuuniyo wadada Eebe ee toosan. Saba' (1-6).

7. Waxey dhaheen kuwii gaaaloobey maydin tusinnaa idiin ka warrami in marka laydinkala geeyo (jidhkiinna) kala gayn dhamaanteed in abuur cusub leydin abuuri.

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا هَلْ نَدُلُّكُمْ عَلَىٰ رَجُلٍ يُنْبئُكُمْ
بِأَمْزِقَتِهِمْ كُلِّ مَمْزِقٍ إِنَّكُمْ لَأَنْتُمْ لَخَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿٧﴾

8. Ma Eebuu ku been abuuran mase wuu waalanyahay, saas ma aha ee kuwaan rumeynin aakhiro waxay ku sugnaan cadaab iyo baadi fog.

أَفَرِحْنَا عَلَىٰ اللَّهِ كَذِبًا أَمْ بِهِ جِنَّةٌ بَلِ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ
بِالْآخِرَةِ فِي الْعَذَابِ وَالضَّلَالِ الْبَعِيدِ ﴿٨﴾

9. Miyeyna arkaynin waxa hortooda ah iyo waxa gadaashooda ah oo samo iyo dhul ah hadaan doono waxaanu la goyn dhulka, mise waxaan ku soo rideynaa goosimo samada kamid ah arintaasna aayadbaa ugu sugan adoonkastoo towbadkeen badan.

أَفَلَمْ يَرَوْا إِلَىٰ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ مِنَ السَّمَاءِ
وَالْأَرْضِ إِنَّ شَأْنَهُمْ لَشَدِيدٌ أَوْ نُحِيطُ عَلَيْهِمْ
كَيْسَفَاتِنَ السَّمَاءِ إِنْ فِي ذَلِكَ لَآيَةٌ
لِّعِبَادٍ عَبْدٍ مُّنِيبٍ ﴿٩﴾

10. Dhab ahaanbaan u siinay Nabi Daawuud fadli (dheeraad) xaganaga ah, waxaana nidhi buurahoow la celceliya tasbiixda, shimbirahoowna (la celceliya tasbiixda), waxaana u jilciney birta.

* وَلَقَدْ آتَيْنَا دَاوُدَ وَسُلَيْمَانَ أَسْفُلًا وَيُجِبَالَ أُوَيْ
مَعَهُ وَالظُّبَيْرَ وَالنَّالَةَ الْحَدِيدِ ﴿١٠﴾

11. Waxaana ku nidhi ka samee diricyada (dharka dagaalka) sugna tixiddeeda wanaagna fala, waxaad faleeysaana waan arkaa.

إِنْ أَعْمَلَ سُلَيْمَانَ وَقَدَّرَ فِي السَّرِّ وَأَعْمَلُوا
صَلِحًا إِنِّي بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١١﴾

Gaaladu had iyo jeer waxay diidaan xaqa kana jeedsadaan, mar waxay inkiraan qiyaamada marna waxay nabiga ku sheegaan been abuurte ama waalli, waxaase jirta iney baadi ku suganyihiin meyse ku waana qaataan cirka iyo dhulka dhan walba ka jira, haduu Eebe doonana uu dhulka la goyn karo ama cirka ku soo ridi karo, ka dib wuxuu Eebe ka waramay nabi Daawuud si loogu Waano qaaato iyo in buuraha iyo shimbiruhu la tasbiixsanjireen, Birtana loo jilciyey si uu uga sameeyo dharka dagaalka, Eebana farey inuu wanaagsameeyo, illeen Eebe wax walba waa arkaaye. Saba' (7-11).

12. Nabi suleymaana waxaan u Sak-

وَلِسُلَيْمَانَ الرِّيحَ عُدُّهَا شَهْرٌ وَرَوَّحُهَا شَهْرٌ

hirray dabeysa, kallahaadeedu waa bil, carraabaheedna waa bil, waxaan u dureeriney il Nuxaas ah (maar) Jinigana waxaa ka mid ah kuwo ku hor shaqeeya idanka Eebe, ruuxii ka mid ah oo ka iilata amarkanaga waxaan dhadhansii-neeynaa cadaabka saciir.

وَأَسْأَلُ اللَّهَ عَنِ الْفِطْرِ وَمِنَ الْجِنِّ مَنْ يَعْمَلُ بَيْنَ يَدَيْهِ إِذْ يُرِيَّهُمْ وَمَنْ يَرْجِعْ مِنْهُمْ عَنْ أَمْرِنَا نَذِقْهُ مِنْ عَذَابِ السَّعِيرِ ﴿١٣﴾

13. Waxay u sameyn suleymaan wuxuu doono oo mixraabyo (Fooqaq) iyo suurooyin, iyo xeedhooyin dar oo kale ah, iyo dharyo sugan, waxaana ku nidhi fala ehelka Daawuudow mahadnaq, waxaana yar adoomadayda shugriga badan.

يَعْمَلُونَ لَهُ مَا يَشَاءُ مِنْ مَحْدِيبٍ وَنَمَثِيلٍ إِحْقَانٍ كَالْجُؤَابِ وَقُدُورٍ رَاسِيَتٍ أَعْمَلُوا آلَ دَاوُدَ شُكْرًا وَقِيلَ لَهُمْ عَادُوا الشُّكْرَ ﴿١٣﴾

14. Markaan geerida ku xukunay Nabi suleymaan wax tusiyeey geeridiisa ma jiro oon ahayn aboorka cunay ushiisa, markuu dhacay yaa waxaa u cadaaday jinigii hadey waxa maqan ogyihiin ineyna ku nagaadeen cadaab wax du-leeya (shaqadiisa darteed).

فَلَمَّا فَضَيْنَا عَلَيْهِ الْمَوْتَ مَا دَلَّهُمْ عَلَى مَوْتِهِ إِلَّا دَابَّةُ الْأَرْضِ تَأْكُلُ مِنْسَأَتَهُمْ فَلَمَّا خَرَّ تَبَيَّتَ الْجِبْرُ أَنْ لَوْ كَانُوا يَعْلَمُونَ الْعِيبَ مَا لِيَشُوفِي الْعَذَابِ الْمُهِينِ ﴿١٤﴾

markau Eebe sheegay qisadii Nabi Daawuud iyo waxa Eebe siiyeey wuxuu raaciyeey qisadii wiilkiisa Nabi suleymaan ahaa iyo in Eebe u sakhiray dabeysa oo orod dheer kallahaad iyo carraababa mid walbana ay ku goyn in bil loo socdo maartana loojiiciyeey, jinigana ku shaqay jiray amarka Eebe iyagoo usameyn guryo iyo sawirro iyo weelal iyo daryo waawayn, arayna Daawuud iyo ehelkiisa iney Eebe ku mahdiyaan, in kastoo dad mahad naqaa yaryahay, Jiniguna inkastoo uu sheeganayey inuu ogyahay waxa maqan hadana waxaa ka qarsoomay geeridii Nabi suleymaan oo sidiibay shaqada ugu jireen, ilaa ushii uu ku tiirsanaa aboor cuno oo dhaco, haday waxa maqan ogyihiin ma ayna wadeen shaqadaas adag, waxaana inagu waajib ah inaan rumeyno qisadaas Nabiyada sida quraanku inoo sheegay. Saba' (12-14).

15. Guryihii reer sabaad waxaa ku sugnayd calaamo, Beeraana ka xigay xagga midig iyo xagga bidixba, waxaana Eebe ku yidhi cuna risqiga Eebihiiin kuna mahadiya, waa balad wanaagsan iyo Eebe dambi dhaafbadane.

لَقَدْ كَانُوا لَاسِيًّا فِي مَسْكِئَةٍ آيَةً جَنَّاتٍ عَنْ يَمِينٍ وَشِمَالٍ كُلُّوا مِنْ رِزْقِ رَبِّكُمْ وَاشْكُرُوا لِلَّهِ بَلَدُهُ طَيِّبَةٌ وَرَبِّ غَفُورٌ ﴿١٥﴾

16. Wayse jeedsadeen, waxaana ku diray daad daran, waxaana ku badaley labadoodii beerood beero kale oo geedo khadhaadh iyo qoryo iyo sidri yar ah.

فَاعْرُضُوا أَفَارِسَنَا عَلَيْهِمْ سَبِيلَ الْعَرَمِ وَبَدَّلْنَاهُمْ بِجَنَّتَيْهِمْ جَنَّتَيْنِ ذَوَاتِ أُكُلٍ خَمْطٍ وَأَثَلٍ وَشَيْءٍ مِنْ سِدْرٍ قَلِيلٍ ﴿١٦﴾

17. Sidaasaana ku abaalmarinay gaalnimadoodii darteed, abaalmarin xunna waxaan abaal marinaa kuwa gaalnimada badan.

ذَٰلِكَ جَزَاءُ مَن كَفَرَ ۖ وَهَلْ يُجْزَىٰ إِلَّا
الْكُفُورُ ﴿٧﴾

18. Waxaana yeeley dhexhooda iyo magaalooyinkii barakeysnaa (Yaman iyo Qudus) magaalooyin muuqdo waxaana qadaray socodkooda, waxaana ku nidhi ku socda dhexdeeda habeen iyo maalinba idinkoo aamin ah.

وَجَعَلْنَا بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ الْقُرَىٰ الَّتِي بَرَكْنَا فِيهَا قُرَىٰ ظَهْرًا ۚ وَقَدَرْنَا فِيهَا السَّيْرَ ۖ وَأَوْفِيهَا الْيَاكِلَ
وَأَيَّامًا آمِنِينَ ﴿٨﴾

19. Waxayse dhaheen Eebow noo kala fogee socodka, wayna dulmiyeen naf-tooda, waxaana ka yeelay wax lagu sheekeysto.

فَقَالُوا رَبَّنَا بَعْدَ بَيْنِ أَسْفَارِنَا وَظَلَمُوا أَنفُسَهُمْ
فَجَعَلْنَا هُمَ لِحَادِيثٍ وَمَرَاقِنَهُمْ كُلِّ مُمَرِّقٍ إِن فِي ذَٰلِكَ
لَآيَاتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿٩﴾

waana kala goyney, sidaasna waxaa ugu sugan calaamo ruux kastoo Samir badanoo Mahadin badan.

Saba waxay aheyd dowlad ka dhisneyd Yaman oo Eebe nimco siiyey dadkeeda uuna faray inay cunaan nimcada Eebe kuna mahdiyaan, caabudaana, weyse inkireen oo xaqa ka jeedsadeen, markaasaa Eebe ku ciqaabay inuu ku siidaayo daad daran oo maansheeyey biyo xidheeka ma'ribna kharibey markaasey u kala tageen aduunka beerahoodii fiicanaana lagu badalay geedo khadhaadh oo xun.

Kibirkooodii dartiis yaana saas loogu abaalmariyey, tan kale markii Eebe ugu nicmeeyey magaalooyin is haya oy ku nastaan safarkooda xagga shaam yey warsadeen in loo kala fogeeyo, markaas Eebe kala diray kana yeeley wax lagu sheekeysto, Saba' (15-19).

20. Dhab ahaan waxaa ku rumoobey gaalada korkooda Iblis Malihiiisii, wayna raaceen wax yar oo ka mid ah oo mu'min ah mooyee.

وَلَقَدْ صَدَّقَ عَلَيْهِمْ إِبْلِيسُ ظَنَّهُ ۖ فَاتَّبَعُوهُ إِلَّا
فَرِيقًا مِّنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠﴾

21. Mu'miniinta awood kuma laha ibliis wax kalana uma aanaan yeelin inay kala muuqato mooyee ruuxa rumeeyey Aakhiro iyo kan ka shakisan xaggeeda. Eebahaana wax walba waa ilaaliye.

وَمَا كَانَ لَهُ عَلَيْهِمْ مِنْ سُلْطَانٍ إِلَّا لِيَعْلَمَنَ
يَوْمَئِذٍ بِالْآخِرَةِ مَن هُوَ مِنْهَا فِي شَاكٍ ۚ
وَرَبُّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ حَفِيفٌ ﴿١١﴾

22. Waxaad dhahdaa u yeedha kuwaad sheegateen Eebe ka sokow (iney ilaahyihiin) kuma hantaan darro wax la eg samooyinka iyo dhulka midna, wax wadaag ahna «shirkadna» kumaleh dhexdooda Eebe wax u kaalmeeyana kuma laha khalqiga.

قُلْ أَدْعُوا الَّذِينَ رَزَقْتُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ لَا يُمْلِكُونَ
مِثْقَالَ ذَرَّةٍ فِي السَّمَوَاتِ وَلَا فِي الْأَرْضِ وَمَا لَهُمْ
فِيهَا مِن يَّشْرِكٍ وَلَا مِثْقَالَ حَبَّةٍ خَمْبٍ ﴿١٢﴾

23. Kumana anfaddo shafeeco Eebe agtiisa, ruuxuusan idmin. Markase laga faydo argagaxa quluubtooda waxay dhihi muxuuyidhi Eebihii, markaasey dhihi kuwa shafeeci wuxuu yidhi xaq waana Eebaha sarreeya ee weyn.

وَلَا تَنْفَعُ الشَّفَعَةُ عِنْدَهُ إِلَّا لِمَنْ أَدْرَأَ لَهُمْ حَقًّا إِذَا
فُرِجَ عَنْ قُلُوبِهِمْ قَالُوا مَاذَا قَالَ رَبُّكُمْ قَالُوا الْحَقُّ
وَهُوَ الْعَلِيُّ الْكَبِيرُ ﴿١٣﴾

Iblis lacanadi ha ku dhacdo wuxuu ku dhaartey inuu galaafan waxbadan oo dadka ka mid ah, waxaana raacay wax badan, mu'miniinse awood kuma leh inuu duufsado Eebana wax walba waa awoodaa ee waxuu saas ufalay imtxaan iyo inay kala muuqdaan mu'miniinta iyo gaaladu.

Wax cirka ama dhulka maamulkooda Eebe la wadaagana ma jiro wax shafeecina ma jiro idanka Eebe La'aantiis Eebana had iyo jeer xaqa iyo runta yuu sheegaa, waxaana sugnaaday in Eebe u dhihi Rasuulka naxariis iyo nabad galyo korkiisa hayeelee, qiyaamada madaxa kor u qaad oo dheh waa lagu maqliye oo warso waa lagu siine oo shafeec waa lagaa shafeeco aqbalaye. Saba' (20-23).

24. Waxaad dhahdaa yaa idinka arsaaqa samooyinka iyo dhulka, waxaad dhahdaa Eebe, anaga iyo idinka mid unbaa hanuunsan ama baadicad ku sugan.

﴿قُلْ مَنْ يَرْزُقُكُمْ مِنَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ
قُلْ اللَّهُ وَإِنَّا أَوْ أَوْلِيَاءُ لَمَعْلَمٌ هُدًى أَوْفٍ ضَلَالٍ
مُتَّبِعِينَ ﴿١٤﴾﴾

25. Waxaad dhahdaa laydin warsan mahayo waxaan dambaabney anagana nalama warsado waxaad camalfaley-saan.

﴿قُلْ لَا تَسْتَلُوتُ عَمَّا أَعْرَمْنَا وَلَا تَسْئَلُ عَمَّا
تَعْمَلُونَ ﴿١٥﴾﴾

26. Waxaad dhahdaa waxaa ina kulmin Eebaheen, markaasuu ina kala xukumin si xaqa ah waana caadil wax walba og.

﴿قُلْ يَجْمَعُ بَيْنَنَا رَبُّنَا ثُمَّ يَفْتَحُ بَيْنَنَا بِالْحَقِّ
وَهُوَ الْقَاسِحُ الْعَلِيمُ ﴿١٦﴾﴾

27. waxaad dhahdaa i tusiya kuwaad Eebe haleeshiiseen oo shurako ah (wax la wadaago) saas ma aha ee Eebe waa adkaade falsan.

﴿قُلْ أَرُونِي الَّذِينَ أَحَقُّم بِهِ شُرَكَاءَ كَلَّابٍ
هُوَ اللَّهُ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١٧﴾﴾

Eebaa dadka iyo khalqiga kalaba ka arsaaqa cirka iyo dhulka, gaaladii horana haddii la warsado saasey ku jawaabi ileen, ileen waxkale oo roobkeena ama doog soo bixiya majiraane. Xaquana waa mid kaliya, dambi ruux faleyna cid kale lama warsado Eebana wuxuu kulmin dadka maalinta qiyaamaha wuxuuna u kala xukumi si cadaalad ah, wax Eebenimada la wadaagana ma jiro, waxay gaaladu caabudi oo Eebe ka soo hadhayna dhammaan waa wax kama jiraan beenbeen ah. Saba' (24-27).

28. Kuumaanaan dirin waxaan dadkoo dhan ahayn, adoo u bishaaraynaya Mu'miniinta, una digi gaalada, laakiin dadka badidiisu ma oga.

﴿وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا كَافَّةً لِّلنَّاسِ بَشِيرًا وَنَذِيرًا
وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨﴾﴾

29. Waxayna dhihi waa goorma yaboo-
haasi (sobixinta) hadaad run sheegay-
saan.

وَيَقُولُونَ مَتَى هَذَا الْوَعْدُ إِن كُنْتُمْ
صَادِقِينَ ﴿٢٩﴾

30. Waxaad dhahdaa waxaa idiin su-
gnaaday Waqti aydaan saacad ka dib
dhacaynin kana hor dhacaynin.

قُلْ لَكُمْ رَيْبَعًا يَوْمَ لَا تَسْتَعْتَبُونَ عَنْهُ سَاعَةً
وَلَا تَسْتَقْدِمُونَ ﴿٣٠﴾

31. Waxay dheheenna kuwii galoobay
rumeynmayno quraankan iyo kuwii ka
horreeyey midna, hadaad arki lahayd
daalimiinta oo taagan Eebe agtiisa
(qiyaamada) oo qaarkood qaarka kale
hadal u celin ooy ku dhihi kuwii
raaciyadda ahaa kuwii madaxda ahaa
ee isla waynaa hadaydaan jirin waxaan
ahaan laheyn Mu'miniin. (waxaad) arki
lahayd arin weyn oo lala yaabo).

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لَنْ نُؤْمِنَ بِهَذَا الْقُرْآنِ
وَلَا بِالَّذِي بَيْنَ يَدَيْهِ وَلَوْ تَرَى إِذِ الظَّالِمُونَ
مَوْفُورِينَ عِنْدَ رَبِّهِمْ يَرْجِعُ بَعْضُهُمْ إِلَى بَعْضٍ
الْقَوْلَ يَقُولُ الَّذِينَ اسْتُضِعُوا لِلَّذِينَ اسْتَكَرُّوا
لَوْلَا أَنْتُمْ لَكُنَّا مُؤْمِنِينَ ﴿٣١﴾

Nabiga Muxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu Eebe u diray dhamaan khalqiga si uu ugu bishaareeyo uguna digo, inkasta oo gaaladu diideen. Waxaana sugnaatay in Rasuulku (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) yidhi: (Waxaa la iibixiyey Madow iyo casaanba) «Bukhaari iyi Muslim yaa Jaabir binu Cabdullaahi ka wariyey». Qiyaamada waqti bay leedahay ayna ka dib dhacayn kana hormarayn, Quraanka iyo kutubtii ka horraysayna Gaaladii way diideen oo beeniyeen, muxuuse utari calaacal markay Qiyaamada tagaan Eebe agtiisa ooy doodaan Raaciyey iyo Madaxba. Saba' (28-31).

32. Kuwii iskibriyey (Madaxdii) waxay
ku dhaheen kuwii tabarta yaraa (Raa-
ciyaddii) ma anagaa idinka celinay
hanuunka markuu idiinyimid saas ma
aha ee idinkaa danbiilayaal ahaa.

قَالَ الَّذِينَ اسْتَكَرُّوا لِلَّذِينَ اسْتُضِعُوا لَنْ
صَدَدَ تَكْفُرٍ عَنِ الْهُدَىٰ بَعْدَ إِذْ جَاءَهُمْ كُرْبٌ
كُنتُمْ مُجْرِمِينَ ﴿٣٢﴾

33. Kuwii tabarta yaraa (raaciyaddii)
waxay ku dhaheen kuwii iskibriyay
(Madaxdii): saasma aha ee waxaa ha-
nuunka naga celiyay dhagartii Habeen
iyo Maalinba markaad nafarayseen
inaan Eebe ka gaalowno una yeelo
shariigyo, Waxay qarsadaan qoomamo
markay arkeen cadaabka, Waxaana
yeellay kuwii gaaloobay luquntooda
Biro Naar ah. Miyaa laga abaalmarinin
gaaladu waxay camal faleen mooyee.

وَقَالَ الَّذِينَ اسْتُضِعُوا لِلَّذِينَ اسْتَكَرُّوا بَلْ
مَكْرًا بَلِيلٌ وَالنَّهَارُ إِذْ تَأْمُرُونَنَا أَنْ نَكْفُرَ بِاللَّهِ
وَنَجْعَلَ لَهُمْ أَدْنًا فَوَاسُرُوا الْإِندَامَةَ لَعَنَ أُولُو الْعَدَابِ
وَجَعَلْنَا الْأَعْظَمَ فِي أَعْيُنِ الَّذِينَ كَفَرُوا أَهْلَ
يُحْزِنُونَ أَلَمَّا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٣٣﴾

Sida aayado badanba caddrryeeen Maalinta Qiyaamo Nafwalba waxay iska fageyn Danbiga Ruuxakale, aayadahanna waxay cadaayn in Maalinta Qiyaame ay doodi dhexmari Madaxdii iyo kuway xukumi jireen ee xaqa ka leexday oo raaciyaddii ay eersan Madaxdii markey arkaan dhibaataada Qiyaamaha iyo Cadinaada daraniyago sheegi hadayna Madaxdaas baasi jirin ooyan Xaqa ka leexinin inay toosnaanlahaayeen, haseyeeshee waxay ugu jawaabeen kuwii madaxda ahaa ineyna dhuminin iyagoo ee ay ahaayeen kuwo iskood u xun dharaartaana way qoomamooden markay arkeen Cadaabka loo darbay, maxayse anfici qoomamo markaas oo kale, taasina waxay kadigi inaan Xumaan iyo Eebe Caasi laguraacin laguna adeecin Cidna. Saba' (32-33).

34. Magaalo kasta oo aan dige (Nabi) u dirro waxay dhahaan kuwoodii loo nicmeeyay anagu waxa laydiinku soo diray waan ka gaalownay.

وَمَا أَرْسَلْنَا فِي قَرْيَةٍ مِّن نَّبِيٍّ إِلَّا قَالَ مَثَرُكُمْ هَاهُنَا
بِمَا أُرْسِلْتُمْ بِهِ كَافِرُونَ ﴿٣٤﴾

35. Waxayna dhaheen anagaa xoolo iyo Caruurba idinka badan, nalamana ca-daabayo.

وَقَالُوا لَوْ كُنَّا رَبُّكُمْ لَكُنَّا مُرْسِلِينَ
وَمَا نَحْنُ بِمُعَذِّبِينَ ﴿٣٥﴾

36. Waxaad dhahdaa Eebehay wuxuu u fidiyaa rizqiga ruuxuu doono, wuuna ku cidhiidhiyaa ruuxuu doono, laakiin dadka badankiisu ma oga.

قُلْ إِنْ رَبِّي يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَن يَشَاءُ وَيَقْدِرُ وَلَكِنَّ
أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٦﴾

37. Ma aha xoolahiinnu iyo caruurtiin-nu kuwii noo kiin dhaweeya, hase yeeshee ruuxii rumeeya (xaqa) oo camal fiican fala, kuwaas waxaa u sugnaaday abaalmarin labalaab ah camalkooda dartiis, waxayna ku aamin noqdaan qawlado janno.

وَمَا أَمْوَالُكُمْ وَلَا أَوْلَادُكُمْ بِالَّذِي نَقَرْتُمْ عَلَيْكُمْ عِدْدَانًا رِّزْقًا إِلَّا
مَنْ ءَامَنَ وَعَمِلَ صَالِحًا فَأُولَئِكَ لَهُمْ جَزَاءُ الضَّعِيفِ
بِمَا عَمِلُوا وَأَهُمٌ فِي الْأَعْرَافِ ؕ ﴿٣٧﴾

Aayadahan ookale waa ku badanyihiin Quraanka Nabigaana lagu calool adkayn, waxaana caado ah in dadku markaay dhargaan ay kibraan xaqana diidaankuwaase Eebe doono wuu ka sooreeba, Carruur iyo Xoolana wax lagu faano ma ahamaxaayeley kuma tusiso Jeclaanta Eebe cadaabna kaafuranmayse, Risqiguna Eebe awoodiisa yuu ku jiraa, ciduu doonana waa u waacsin, ciduu doonana wuu ku cidhiidhin, imtixaan dartiiswaxaase Eebe loogu dhawaadaa rumayn xaqa iyo camal fiican, kuwa saas falana waxay ku aamin noqon Jannada Eebe qawladaheeda, waxase Muhimkako ah waa in la ogaado inuusan ahayn qiimuhu xoolobadan, caruur, Madaxtinimo iyo hodantinimo adduun ee sharaf iyo wanaag waa xaqoo lagu tooso iyo wanaag Jacayl. Saba' (34-37).

38. Kuwa u socda ka (reebidda) aayaad-kanaga iyagoo isleh Eebe daaliya ku-waas waxaa lagu kulmin cadaab.

وَالَّذِينَ يَسْعَوْنَ فِي الْأَرْضِ فَجْرِينَ
أُولَئِكَ فِي الْعَذَابِ مُحْضَرُونَ ﴿٣٨﴾

39. Waxaad dhahdaa Eebehay wuxuu risqiga u fidiyaa cidduu doono oo addoomadiisa ka mid ah, kuu doonana

قُلْ إِنْ رَبِّي يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَن يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ
وَيَقْدِرُ لَهُ ۖ وَمَا أَنْفَقْتُمْ مِن شَيْءٍ فَهُوَ يُخْلِفُهُ ۖ وَهُوَ

wuu ku cidhiidhyaa, waxaad bixisaan oo kastana Eebaa idiin bedeli, Eebena isagaa u khayroon wax wax arsaqa.

حَيْرَ الرَّزْقِينَ ﴿٣٨﴾

40. Xusuuso maalinta uu Eebe kulmin dhamaan gaalada, markaas uu ku odhan malaa'igtiisa kuwani ma idinkay idin caabudi jireen.

وَيَوْمَ نَحْشُرُهُمْ جِيعًا ثُمَّ يَقُولُ لِلْمَلَائِكَةِ أَهْمُولَاءُ
إِنِّي كَارِهُوا وَعَبُدُونِ ﴿٤٠﴾

41. Markaas ay dhihi adaa ceeb ka fog Eebow, adaa gargaarahanaga ah iyaga ka sokay, waxayse caabudi jireen Jinni badidoodna isagay rumaysnaayeen.

قَالُوا سُبْحَانَكَ أَنْتَ وَإِسْمَائِنَ دُونَهم بَلْ كَانُوا
يَعْبُدُونَ الْغَيْنَ أَكْثَرَهُمْ بِهِمْ مُؤْمِنُونَ ﴿٤١﴾

42. Maantase «Qiyaamada» uma hanato qaarkiin qaarkakale nacfi iyo dhib midna.

قَالِيَوْمَ لَا يَمْلِكُ بَعْضُكُمْ لِعِصْيَانِهم تَفْعَا وَلَا تَضُرُّهُمُ نَقْرُوهُ
لِلَّذِينَ ظَلَمُوا ذُوقُوا عَذَابَ النَّارِ الَّتِي كُنتُمْ بِهَا
تُكْفِرُونَ ﴿٤٢﴾

waxaana ku dhahaynaa kuwii dulmi falay dhadhamiya cadaabka naartaad beeninayseen.

Diinta Eebe waa xaq waafaqsan abuuridda dadka wanaagsan, cidiise isku dayda inay la dagaalanto dadkana ka celis oisagaa lugooyo ku dhici kuna dambayn Cadaab iyo halaag, tan kale ruux kasta oo Eebe risqi badan siiyay ama ku cidhiidhyaa oo wax bixiya Eebe wuu u badali oo wax khayrleh yuu u daba marin. Eebe kaliya yaana muta cibaado maalinta Qiyaamana waxa la soo kulmin Caabudihii iyo la caabudihii Eebe ka soo hadhay waxna isuma tarayaan Naarbaana lagu abaal marin, kuwaan in la caabudo Raalli ka ahaynse kuma jiraan. Saba' (38-42).

43. Marka lagu akhriyo korkooda aayaadkanaga waxay dhahayaan kani ma aha mid dooni inuu idinka iilo waxay Aabbayowgiin caabudijireen mooyee, waxayna dheheen kan (quraanku) ma aha waxaan beenabuurasho ahayn waxayna dhaheen kuwii Gaaloo-bay Xaqu markuu u yimid kani waxaan sixir muuqda ahayn ma aha.

وَإِذْ أَنْشَأَ عَلَيْهِمُ آيَاتِنَا بَيِّنَاتٍ قَالُوا مَا هَذَا إِلَّا أَرْضٌ
يُرِيدُ أَنْ يُنصِبَ عَلَيْكُمُ آيَاتِنَا عَمَّا كَانَ يَعْبُدُ آبَاءَكُمْ وَقَالُوا مَا هَذَا
إِلَّا الْفَأْذَنُ فَفُتِّرِ وَوَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لَئِن لَّمْ نَرَا
جَاءَهُمْ مِنْ هَذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٤٣﴾

44. Ma aanaan siinin Kutubo ay akhriyaan, umana aanaan dirin xagooda dige kaa horreeyay (Carabta).

وَمَا آتَيْنَاهُمْ مِنْ كُتُبٍ يَدْرُسُونَهَا وَمَا أَرْسَلْنَا
إِلَيْهِمْ قَبْلَكَ مِنْ نَذِيرٍ ﴿٤٤﴾

45. Waxay beeniyeen (xaqa) kuwii ka horreeyayna, mana gaadhin (kuwii Nabiga beeniyay) Toban meelood meel waxaan siinay kuwaas, waxayna bee-

وَكَذَّبَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَمَا تَبَلَّغُوا وَعَسَّارَ
مَاءَ آتَيْنَاهُمْ فَكَذَّبُوا رَسُولِيَّ فَكَيْفَ كَانَ نَكِيرِ ﴿٤٥﴾

niyeen Rasuuladaydii, Sayse noqotay ciqaabtaydii (aan ciqaabay kuwaas xaqaa beeniyay).

Eebe wuxuu warrami gaaladii iyo siday ciqaab daran u muteen markay beeniyeen xaqii Nabiga loo soo dhiibay ayna afxumeeyeen Nabigii (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) kuna sheegeen inuu ka leexin waxay Aabayooogood caabudi jireen, ayna ku sheegeen been abuur iyo sixir, taasna waa caadada jaahilliinta aan fikiraynin Xaqana aan dhab u eegaynin, waxayna ahaayeen intaan Nabiga loo dirin kuwo jeclaa in wax u diga loo soo diro maxaayeelay kitaab iyo Nabi midna horay uma lahay, waxaase roonayd inay kuwaano qaataan gaaladii ka horeeysay ee xaqaa beeniyeey Kana xoogbadnaa iyaga Eebana ciqaabay. Saba' (43-45).

46. Waxaad dhahdaa Nabiyow mid kaliya yaan idinku waanin inaad u jahaysataan Eebe laba labo iyo mid mid markaasna aad fikirtaan inaan saaxiibkiin «Nabiga muxamed ah» uusan waallayn, uu digihiinna cadaab daran hortiisna uu yahay.

﴿قُلْ إِنَّمَا أَعْظُمُكُمْ بَٰرِعَةً أَن تَقُومُوا لِلَّهِ مَشئٍ وَفُرَادَىٰ ثُمَّ تَتَفَكَّرُونَ مَا بِصَٰلِحِكُمْ مِنَّ جَنَّةٍ إِن هِيَ إِلَّا أَتَدِيرُ لَكُمْ يَوْمَئِذٍ بَٰرِعَةً يَدَىٰ عَذَابٍ شَدِيدٍ ﴿٤٦﴾﴾

47. Waxaad dhahdaa Nabiyow idiinna warsanin ujuuro idinkaase iskaleh (hadii laydin warsado), Ujuuradayda Eebe unbaa isiin, wax walbana Eebe wuu daalacan.

﴿قُلْ مَا سَأَلْتُكُم مِّنْ أَجْرٍ فَهُوَ لَكُمْ إِن أَجْرِي إِلَى اللَّهِ أَن تَوَكَّلُوا عَلَيَّ كُلٌّ لِّسِيءٍ شَٰهِدٌ ﴿٤٧﴾﴾

48. Waxaad dhahdaa Eebahay xaquu soo dajiyaan (Xumaanta ku baabi'iyaa) waana wax maqan oge badane.

﴿قُلْ إِن رَبِّي يَقْذِفُ بِالْحَقِّ عَلَٰلِ الْغُيُوبِ ﴿٤٨﴾﴾

49. Waxaad dhahdaa xaqii waa yimid, baadilna waa tirtirmay.

﴿قُلْ جَاءَ الْحَقُّ وَمَا يُدِئُ الْبَٰتِلُ وَمَا يُعِيدُ ﴿٤٩﴾﴾

50. Waxaad dhahdaa haddaandhumo waxaan uun u dhumay naftayda, haddaan hanuunana waa wixii Eebe ii waxyooday sababtiisa, Eebe waa maqla dhawe.

﴿قُلْ إِن صَلَّيْتُ فَإِنَّمَا أَصِلُّ عَلَىٰ نَفْسِي وَإِن أَنهَدَيْتُ فِيمَا يُوحَىٰ إِلَيَّ رَبِّيَ إِنَّهُ سَمِيعٌ قَرِيبٌ ﴿٥٠﴾﴾

Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee), wuxuu Eebe faray inuu gaalada ku yiraahdo waxaan idiinku waanin inaad labo labo iyo mid mid u fikirtaan si aad u ogaataan inuusan Nabigu waallayn ee u ka digi cadaab daran, wax xoolo iyo ujuura ahna uusan warsanaynin, ee ujuuradisuu Eebe xagiiisa tahay illeen Eebaa wax walba u marag ah oo daalacane xaqana Eebaa ku baabi'iyaa xumaanta iyo baadiilka, Nabiguna ma dhunsana, haddiibase la qadaro inuu dhunsan yahay isagay dhibi, hadduu xaq ku taaganyahay waana dhabtee waana waxyiga iyo mahada Eebe maxay gaalo samayn Eebena wuu maqli dhawyahayna. Saba' (46-50).

51. Hadaad arki lahayd Nabiyow markay argagaxaan gaaladu oo meeley u cararaan jirin oo meel dhaw laga qabto, (waxaad arki lahayd arrin wayn).

وَلَوْ تَرَىٰ إِذْ فِرْعَوْنُ فَلَا فُتُورَ وَأَخَذُوا مِن مَّكَانٍ قَرِيبٍ ﴿٥١﴾

52. Waxay dhihi markaas waxaan rumaynay (xaqa) xagay uga ahaan inay meel fog wax ku qaataan (rumayn).

وَقَالُوا إِنَّمَا آمَنَ بِنَبِيِّهِ وَإِنَّا لَنَاوِسُ مِن مَّكَانٍ بَعِيدٍ ﴿٥٢﴾

53. Dhab ahaanna waa iyagii uga gaalobay xaqa horay ay ka tuurayeen waxayn ogayn meel fog.

وَقَدْ كَفَرُوا رَبَّهُمْ مِنْ قَبْلُ وَيَقْدِرُونَ بِالْغَيْبِ مِن مَّكَانٍ بَعِيدٍ ﴿٥٣﴾

54. Waana la kala ooday iyaga iyo waxay doonayeen sidii lagu falay kuwii la midka ahaa ee ka horeeyay, waxayna ahaayeen kuwa shaki daran ku sugan.

وَجِيلَ بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ مَا يَشْتَهُونَ كَمَا فُعِلَ بِأَشْيَاعِهِمْ مِّن قَبْلُ إِنَّهُمْ كَانُوا فِي شَكٍّ مُّرِيبٍ ﴿٥٤﴾

Qiyaamadu waa maalin daran, oo dhib iyo shiddo badan lagana argagaxo, markase gaalada si kada ah loo qabto, waqti wax la rumecyana dhamaaday oo fogaaday illeen aduun kiibay ahayde, iyana waa kuwii adduunka ku gaalobay ee xaqa beeniyey ee jaahilnimo iyo waxwalba oo xumaan ah ku sheegay waxay jeclaayeen la kala dheereyo oo lakala awdo sidii lagu falay kuwii la Midka ahaa ee ka horreeyey illeen xaqay shakiyeene, muxuu tari calaalac iyo catow, ruuxii caqli lehse waa inuu xaqa si fiican ugu taagnaado, si uu u nabadgalo. qataade wuxuu yidhi iska jira shaki illeen ruuxii shaki ku dhinta waa lagu soo bixin, ruuxi yaqin ku dhinta waa lagu soo bixine. Saba' (51-54).



Suurat Faadhira

سُورَةُ فَاطِرٍ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

1. Mahad Eebaha billabay «abuura» samooyinka iyo dhulka yaaleh kana yeelay Malaa 'igta fariinwade, oo garbo labo labo ah iyo saddex saddex iyo afar afar ah leh, wuuna siyaadiyaa Eebe abuuriduu doono, Eebana wax walba wuu karaa.

2. Wixii Eebe dadka ugu nicmeeyo oo naxariis ah wax celin karaa majiro, wuxuu celiyaana wax siidayn kara ma jiro dabadiis, waana adkaade falsan.

3. Dadow xusuusnaada nicmada Eebe ee korkiina ah, abuura kale ma jiraa oo Eebe ka soo hadhay oo idinka arsuqi samada iyo dhulka, Eebe mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo majiro ee xagge laydiin ka iili xaq.

Eebaha cirka iyo dhulka abuura ee malaa'igta diray waxwalbana kara yaa mahad mudan khayrkuu keenana wax celin kara majiro, wuxuu reebana wax keenikaraa ma jiro, dadkana waxaa waajib ku ah inay xusuustaan Nicmada Eebe iyo inaan Eebe mooyeen cid kale wax ka arsuqaynin cirka iyo dhulka. Ibnu cabaas (Eebe isaga iyo Aabihisba ha ka raali noqdee) wuxuu yidhi ma aqoonin macnaha faadir intaan uga imaado Laba nin oo ka mid ah baadiyaha Carbeed oo ku doodi ceel oo mid kood ku yidhi kii kale Anaa faadiray (Bilaabayqodidda). Faadhira (1-3).

4. Hadday ku beeniyaan waxaa dhab ahaan loo beeniyay rasuulladii kaa horreeyay, Eeba xagiisaana loo celin umuuraha.

5. Dadaw yabooha Eebe waa xaq ee yayna idindhagrin nolasha aduunyo yuuna idinkudhagrin Eebe ku dhagris badane (shaydaan).

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الْحَمْدُ لِلَّهِ فَاطِرِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ جَاعِلِ الْمَلَكِ كَتَمُ
رُسُلًا أُولِي الْأَجْنِحَةِ مَشْنَقَىٰ وَتِلْكَ رُزُقُهُ يُرِيدُ فِي الْخَلْقِ
مَا يَشَاءُ إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١﴾

مَا يَفْتَحُ اللَّهُ لِلنَّاسِ مِنْ رَحْمَةٍ فَلَا مُمْسِكَ لَهَا وَمَا يُمْسِكُ
فَلَا يُرْسِلُ لَهُ مِنْ بَعْدِهِ ۗ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٢﴾

يَتَّبِعُ النَّاسُ أَدْرَاكًا وَمَنْعَةً ۗ اللَّهُ عَلَيْكُمْ هَلْ مِنْ خَلْقِي
غَيْرُ اللَّهِ يَتْرُقُكُمْ مِنَ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ فَآَنِي
تُؤْفِكُونَ ﴿٣﴾

وَإِنْ يَكْفُرْ بِكَ فَتَدْكُرْ ۗ إِنَّ رُسُلًا مِنْ قَبْلِكَ وَآلَى اللَّهِ تُرْجَعُ
الْأُمُورُ ﴿٤﴾

يَتَّبِعُ النَّاسُ إِنْ وَعَدَ اللَّهُ حَقًّا فَلَا تَعْرُكُكُمْ الْحَيَاةُ
الدُّنْيَا وَلَا تَعْرُكُكُمْ بِاللَّهِ الْعَرُورُ ﴿٥﴾

6. Shaydaanku waa colkiin ee idinna col ka yeesho, wuxuuna idiin ku yeedhi uun xisbigiisa si ay asaxaabta Naaarta saciir u noqdaan.

إِنَّ الشَّيْطَانَ لَكُمْ عَدُوٌّ فَاتَّخِذُوهُ عَدُوًّا إِنَّمَا يَدْعُوا حِزْبَهُ لِيَكُونُوا مِنْ أَصْحَابِ السَّعِيرِ ﴿٦﴾

7. Kuwii gaalobay waxay mudan cadaab daran, kuwii xaqa rumeeyay oo camal fiican falayna waxay mudan dambi dhaaf iyo ajri wayn.

الَّذِينَ كَفَرُوا لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ كَبِيرٌ ﴿٧﴾

8. Ruuxse loo qurxiyay camalkiisa xun oo u arkay inuu fiicanyahay (ma lamid baa kaan saas falin), Eebe cidduu doono yuu dhumiyaa Ruuxuu doonana wuu Hanuuniyaa ee yeyna Naftaadu ku tagin walbahaarkooda, Eebe waa ogyahay waxay samayne.

أَفَنُورِينَ لَهُ سُوءُ عَلَيْهِمْ قَدْرًا حَسَنًا فَإِنَّ اللَّهَ يُضِلُّ مَنْ يَشَاءُ وَيَهْدِي مَنْ يَشَاءُ فَلَا تَذْهَبُ نَفْسُكَ عَلَيْهِمْ حَسْرَتًا إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ بِمَا يَصْنَعُونَ ﴿٨﴾

Eebaheen had iyo jeer wuxuu calool adkayn jiray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee) wuxuuna xusuusin jiray Nabiyadii hore iyo waxay kala kulmeen gaaladii oo dhib iyo beenin ah, tan kale wuxuu Eebe yabooho wuu dhici' mana haboona in lagu kadsoomo aduunyo, shaydaan kugu kadiyo, illeen waa colka bini aadamkee wuxuuna dooni inaad ka mid noqotid xisbigiisa si aad saciir ula gashid, Xumaanla iyo Wanaaglena ma sina, mana aha in xumaantu kula qurux sanaato, kulana fiicnaato, waase in Eebe Hanuun la warsado xumaantana laga leexo, Nabiguna waxba kama saarna cidii iska dhunta oo shaydaan adeecda. Faadhir (4-8).

9. Eebe waa kan kiray dabaysha oy kiciso daruuro markaasaan u kaxayn magaalo dhimatay (abaarowday) markaasaan ku noolaynay roobkaas dhulka intuu dhintay ka dib, saas weeye soo bixintiina.

وَاللَّهُ الَّذِي أَرْسَلَ الرِّيحَ فَتُبْرِئُ سَحَابًا مَسْقُوعًا إِلَى بَلَدٍ مَيِّتٍ فَأَحْيَيْنَاهِ الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا إِنَّ ذَلِكَ لَلنَّشُورِ ﴿٩﴾

10. Ruuxii dooni sharaf Eebaa iska leh sharaf dhammaanteed, xagiisayna u koraan kalimooyinka fiican, camalka suubanna Wuu kor yeelaa, kuwa xumaanta ku dhagra (maamula) waxay mudan cadaab daran, dhagarta ku-waasna way uun halaagmi.

مَنْ كَانَ يُرِيدِ الْغَيْبَةَ فَلِيهِ الْغَيْبَةُ جَمِيعًا إِلَيْهِ يَصْعَدُ الْكَلِمُ الطَّيِّبُ وَالْعَمَلُ الصَّالِحُ يَرْفَعُهُ وَالَّذِينَ يَمْكُرُونَ السَّيِّئَاتِ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ وَمَكْرُ أُولَئِكَ هُوَ يُبْزَرُ ﴿١٠﴾

11. Eebe waa kan idinka abuuray Carro, hadana dhibic, markaas Lab iyo dhadig, haweenayna wax uurka kuma qaado mana dajiso ogaansho

وَاللَّهُ خَلَقَكُمْ مِنْ تُرَابٍ ثُمَّ نَفَخَ فِيكُمْ مِنْ نَفْثَةِ نَمْرٍ جَعَلَكُمْ أَرْوَاجًا وَمَاتِحِلًا مِنْ نُفُوسٍ وَأَلْطَفُكُمْ لَكُمْ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١١﴾

Eebe mooyee, ruuxii cimri dheer iyo ruuxii cimri gaabanba waxay ku sugan yihiin kitaabka Eebe, waana u fudud yahay.

وَمَا يَعْمَرُونَ مَعْمَرَ وَلَا يُنْقِصُونَ مِنْ عُمْرِهِ إِلَّا فِي كِتَابٍ
إِنَّ ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرٌ ﴿١١﴾

Roobka Eebaa keena siduu dabaysha roobka hor socotaba u keeno, roobkaasoo uu ku nooleeyo magaalo abaarowday doogna ka soo baxo sidsaana loo soo bixin dadka qiyaamada, sharaf iyo cisiba Eebaa iska leh dhamaanteed, wanaaguna Eebuu u koraa, sida uu u kor yeelo camallada fiican, xumaan iyo dhagarna saaxiibkeeda unbay dishaa oy halaagi, Eebana waa kan dadka carro ka abuuray (Aabahood Aadan) hadana candhuuf ka abuuray, kana dhiga Rag iyo Haween wax kastana waa ogyahay Eebe, uur haweenay, dhalidda, cimriga dheer kan gaaban, wax walbana Eebe waa u fudud yahay, xasan basri wuxuu yidhi: Hadal lama aqbaloo camal la'aan tiis. Faadhir (9-11).

12. Ma eka labada badood taassi waa macaantahay si daran, taasina waa dhanaan daran mid kastana waxaad ka cunaysaan hilib cusub, waxaadna kala baxdaan Macdan aad xidhataan, waxaadna arkaysaan doonta oo jiidhi si aad u dalabtaan fadliga Eebe iyo inaad ku mahadisaan.

وَمَا يَسْتَوِي الْبَحْرَانِ هَذَا عَذْبٌ فُرَاتٌ سَائِغٌ شَرَابُهُ
وَهَذَا مِلْحٌ أُجَاجٌ وَمِن كُلِّ تَاكُؤُنٍ لَحْمَاطٍ رِثًا
وَتَسْتَخْرِجُونَ حَلِيَّةً تَتْلَسَوْهَا وَتَرَى الْفُلُوكَ فِيهِ
مَوَاجِرَ لَتَبْتَغُوا مِنْ فَضْلِهِ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٢﴾

13. Habeenka yuu Eebe dhexgaliyaa maalinta Maalintana wuxuu dhexgaliyaa Habeenka, Qoraxda iyo dayaxana wuu sakhiray mid kastana wuxuu ku socdaa muddo magacaaban, saas waxa falana waa Eebihiiin, isagaana xukunka iska leh, waxaadse baryeysaan (caabuday-saan) oo Eebe ka soo hadhay ma hantaan xuub laf timireed.

يُولِجُ اللَّيْلَ فِي النَّهَارِ وَيُؤَلِّجُ النَّهَارَ فِي اللَّيْلِ
وَسَخَّرَ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ لِكُلِّ بَحْرٍ لِيَجْرِيَ لِأَجْلِ
مُسَمًّى ذَلِكُمْ فَضْلُ اللَّهِ يُؤْتِيهِ لِمَن يُرِيدُ
وَالَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ مَا يَمْلِكُونَ مِنْ
قِطْمِيرٍ ﴿١٣﴾

14. Hadaad u yeedhataana idin ma maqlaan, haday idinbase maqlaan wax idiima taraan, Qiyaamadana way diidigaalnimadiinna, cid wax og siddana wax kuugu warrama ma jiro.

إِن تَدْعُوهُمْ لَا يَسْمَعُوا دُعَاءَكُمْ وَلَوْ سَمِعُوا
مَا اسْتَجَابُوا لَكُمْ وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ يَكْفُرُونَ
بِشْرِكِكُمْ وَلَا يُنَبِّئُكَ مِثْلُ خَبِيرٍ ﴿١٤﴾

Wabiyada iyo Badaha Eebaa dureeriya qaarna macaaneeya qaar kalana kharaareeya, cunno iyo Kalluuna mid kasta ku beeray si hilib nadiif ah loogu cuno jowharna loogala baxo, doonyhuna u dhex mushaaxaan, si ay khayraadka Eebe u raadsadaan, looguna mahdiyo Habeenka, Maalinta, Qoraxda, iyo Dayaxaba Eebaa sakhiray si ay ushaqeyyaan tan iyo mudadii loo qabtay xukunka caalamka iyo awoodiisana Eebaa iska leh wax la wadaaga oo wax laga baryi ama wax maqli ama wax ajiibana ma jiro, sida Eebaha wax walba oo wax kuugu cadeeyana ma jiro. Faadhir (12-14).

15. Dadow idinka unbaa fuqara ah (u baahan) Eebe, Eebena waa hodan amaanan.

* يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا اللَّهَ الَّذِي تَسَاءَلُونَ بِهِ وَاللَّهُ وَالدَّارُ
هُوَ الْعَلِيُّ الْحَمِيدُ ﴿١٥﴾

16. Hadduu doono wuu idin dhamayn wuxuuna keeni kuwo cusub.

إِنْ يَشَأْ يُذْهِبْكُمْ وَيَأْتِ بِخَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٦﴾

17. Arrintaasna wax Eebe ku culus ma aha.

وَمَا ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ بِعَزِيزٍ ﴿١٧﴾

18. Nafna naf kale dambigeed ma qaado, haddii looguyeedho Naf culusoo dambaabtay inay xambaarto (danbi naf kale) lagama xambaaro waxba haba noqoto qaraabaneec, waxaad uun u digi kuwa ka yaabi Eebe iyagoo maqan, oo ooga salaadda, ruuxii isdaahiriyaana wuxuu uun isdaahiriya naftiisa, xaga Eebe unbaana loo ahaan (geeri daba-deed).

وَلَا تَقْرَأُ وَلَا تَرْوِي وَلَا تَحْمِلُ وَلَا تَنْقَلِبُ إِلَّا حَمْلَهَا
لَا يَحْمِلُ مِنْهُ شَيْءٌ وَلَوْ كَانَ ذَا قُرْبَىٰ إِلَّا نَسِئًا
الَّذِينَ يَخْتَشُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَيْبِ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ
وَمِمَّنْ نَنْزَلُ فَإِنَّمَا يَسْتَرْزِقُ أَنْفُسَهُمْ وَاللَّهُ
الْمَصِيرُ ﴿١٨﴾

Eebe waa hodan waana ka kaaftoomaa adoomadiisa, iyaguse waa fuqoro u baahan Eebe had iyo jeerba, wuxuuna karaa Eebe inuu halaago ciddii uu doono kuna bedalo cid kale, wax Eebe dhib ku ahna ma aha, tan kale nafu nafkale dambigeed ma qaaddo, ee naf walba waxay kasbatay unbaa horyaala, qaraabonimana danbi lays kagama qaado, waxayse waanadu anfaccada kuwa Eebe ka yaaba iyagoon arkayn, oo salaadda u dadaala, oo xumaan iska daahiriya, dadkuna xagga Eebe unbuu u ahaan, Cikrime wuxuu yidhi: maalinta Qiyaame darisku dariskuu ku dhagi, qaraabaduna way isku dhagiriuxna ruuxa kale wax uma taro Eebe idamkii mooyee. Faadhir (15-18).

19. Ma Eka indhoole iyo wax arke.

وَمَا يَسْتَوِي الْأَعْمَىٰ وَالْبَصِيرُ ﴿١٩﴾

20. Mana eka mugdiyo iyo iftiin.

وَلَا الظُّلُمَاتُ وَلَا النُّورُ ﴿٢٠﴾

21. Mana eka hoos iyo kulayl.

وَلَا الظُّلُّ وَلَا النُّورُ ﴿٢١﴾

22. Mana eka kuwa nool iyo kuwo dhintay, Eebana wuxuu wax maqashihiyaa cidduu doono, mase maqashiin kartid cid qubuur ku sagan (gaaladuna waa wax dhintay oo kale).

وَمَا يَسْتَوِي الْأَحْيَاءُ وَلَا الْأَمْوَاتُ إِنَّ اللَّهَ يُسْمِعُ
مَنْ يَشَاءُ وَمَا أَنْتَ بِمُسْمِعٍ مَّن فِي الْقُبُورِ ﴿٢٢﴾

23. Waxaan u dige ahayn ma tihid.

إِنَّ أَنْتَ إِلَّا نَذِيرٌ ﴿٢٣﴾

24. Annagaa kugu dirray xaq adoo bishaarayn oo digi, umadaan udige loo dirinna ma jirto.

إِنَّا أَرْسَلْنَاكَ بِالْحَقِّ بَشِيرًا وَنَذِيرًا وَإِن مِّنْ أُمَّةٍ
إِلَّا أَحْلَاهُمْ نَذِيرٌ ﴿٢٤﴾

25. Haday gaaladu ku beeniyaan waxaa

وَأَنْ يَكْفُرُوا فَكَذَّبُوا الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ جَاءَتْهُمْ

wax beeniyay kuwii ka horreeyay, waxay ula timid rasuuladoodii xujooyin iyo kutub (waano) oo xukun leh.

رُسُلَهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ وَإِلَّا زُكِّرُوا بِالْكِتَابِ
الْمُنِيرِ ﴿٥٥﴾

26. Markaasaan qabtay kuwii gaaloo-bay, sayse noqotay ciqaabtaydii (aan ciqaabay kuwaas).

ثُمَّ أَخَذُوا الَّذِينَ كَفَرُوا فَاكْفَفُوا كَانْ نَكِيرٍ ﴿٥٦﴾

Eebeheen sarreeye wuxuu inoogu caddeeyay tusaale inayna ekeyn indhoole iyo wax arke, Mudgi iyo Nuur, Ruux dhintay iyo ruux nool. Saasoo kale ma sinna mu'iniinta iyo gaaladu, Eebena cidduu doono oo xaqa jecel yuu wax maqashiiyaa, gaalase quluubtoodu dhimatay wax lama maqashiin karo Nabigana waa uun dige sidii Rasuuladii ka horeeyay ee la beeniyay, Eebena umad qudha kuma dayn jaahilnimo ee cidkasta waxaa loo diray wax u diga oo xaqa u cadeeya oo kutub waano iyo wanaagleh loo soo dhiibay kuwii beeniyayna waa la halligay. Faadhir (19-26).

27. Miyaadan arkayn in Eebe ka soo dajiyay Samada biyo markaasna aan ku soo bixinaa Midho ay kala duwanyihiin midabkoodu, Buurahana waxaa ka mid ah wadooyin cad cad, iyo kuwo guduud ah oo midabo kala duwan leh iyo kuwo madow daran ah.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجْنَا بِهِ
شَجَرَاتٍ مُّخْتَلِفًا أَلْوَانُهَا وَمِنَ الْجِبَالِ جُدَدٌ بَيضٌ
وَحُمْرٌ مُّخْتَلِفٌ أَلْوَانُهَا وَعَرَابِيٌّ سُودٌ ﴿٥٧﴾

28. Dadka iyo dhulsocotada iyo xoolaha waxaa ka mid ah midabo kala duwan saas oo kale. Addoomada Alle, waxa uun Allahood ka baga kuwa Culimada ah.

وَمِنَ النَّاسِ وَالذَّلَابِ وَالْأَنْعَامِ مُخْتَلِفٌ أَلْوَانُهُ
كَذَلِكَ إِنَّمَا يَخْشَى اللَّهَ مِنْ عِبَادِهِ الْعُلَمَاءُ إِنَّ اللَّهَ
عَزِيزٌ غَفُورٌ ﴿٥٨﴾

29. Kuwa akhriya kitaabka Eebe oo salaadda ooga oo wax ka nafaqeyya (ka bixiya) waxaan ku arsaaqnay qarsoodi iyo caddaanba waxay rajayn tijaaro (ganacsi) aan baaraynin.

إِنَّ الَّذِينَ يَتْلُونَ كِتَابَ اللَّهِ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ
وَأَنْفَقُوا مِمَّا رَزَقْنَاهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً يَرْجُونَ تِجَارَةً
لَّنْ نُّبَوِّرَهُمْ ﴿٥٩﴾

30. Si Eebe ugu oofiyo ajrigooda uguna siyaadiyo fadligiisa, illeen Eebe waa dambi dhaafe mahad badane.

لِيُؤْتِيَهُمَ أَجْرَهُمْ وَيَزِيدَهُم مِّن فَضْلِهِ إِنَّهٗ
عَفُورٌ شَكُورٌ ﴿٦٠﴾

Eebe sarreeye wuxuu ku baraarujin qudradiisa iyo waynida awoodiisa uu abuurayna waxyaalo ku kala duwan midabka sida midhaha oo hadana ku soo baxay Biyo kaliya, sido kale buuraha kala duwan, iyo dadka, xoolaha iyo naflayda kalaba, waxaana arintaas u dhug yeelan oo ku waano qaadani culimada Eebe ka cabsada, waxaa kale oo Eebe ka waramay in adoomadiisa rumeeyay ay yihiin kuwa akhriya kitaabka Eebe (quraanka) kuna camalfala wuxuu fari salaadana ooga waxna bixiya hoos iyo korba, waxayna rajayn kuwaasi ganacsi khayr leh oon baaraynin, Eebana wuxuu u oofin ajrigooda wuxuuna u kordhin fadligiisa. Qataade wuxuu yidhi: Mudarif wuxuu ahaa Eebe ha u naxariistee markuu akhriyo aayadan kii dhaha: aayadani waa aayada qurraada. Faadhir (27-30).

31. Kaan kuu waxyoonaay ee Quraanka ah unbaa xaq ah wixii ka horreeyayna u rumayn Eebana addoomadiisa waa ogyahay, arkaana.

وَالَّذِي أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ مِنَ الْكِتَابِ هُوَ الْحَقُّ مُصَدِّقًا
لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ إِنَّ اللَّهَ بِعبَادِهِ لَخَبِيرٌ بَصِيرٌ ﴿٣١﴾

32. Markaasaan Dhaxalsiinay kitaabka kuwaan dooranay oo addoomadanada ka mid ah, waxaase ka mid ah mid dulmiyay naftiisa, iyo mid dhexdhexaystay, iyo mid ku hanuunay khayrka idanka Eebe, arrintaasna waa fadli weyn.

فَمَنْهُمْ ظَالِمٌ لِّنَفْسِهِ وَمِنْهُمْ مُّقْتَصِدٌ وَمِنْهُمْ سَابِقٌ بِالْخَيْرَاتِ إِذِذْنِ اللَّهِ ذَلِكَ هُوَ الْفَضْلُ الْكَبِيرُ ﴿٣٢﴾

33. Jannada cadnin yeyna gali iyagoo loogu xidhi dhexdeeda jijimo (wax lagu xarragoodo) oo dahab iyo Jawharba leh, dhar kooduna dhexdeeda waa xariir.

جَعَلْنَا عَدِينَ يَدْخُلُونَهَا يُحِطُونَ فِيهَا مِنْ آسَاوِرٍ
ذَهَبٍ وَزُفُرٍ وَأُزَاجٍ مِّمَّا سَهَرُوهَا حَرِيرٍ ﴿٣٣﴾

34. Waxayna dhihi waxaa mahad leh Eebaha naga tagsiiyay walbahaarka, illeen Eebeheen waa danbi dhaaf badane mahad badane.

وَقَالُوا الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَذْهَبَ عَنَّا الْحَزْنَ إِنَّ
رَبَّنَا لَغَفُورٌ شَكُورٌ ﴿٣٤﴾

35. Eebihii nadajiyay guri nagaadi fadligiisa dartiis (janno) nagumana taabto dhexdeeda dhib, nagumana taabto daal.

الَّذِي أَحَلَّنَا دَارَ الْمَقَامَةِ مِن فَضْلِهِ لَآيَسْتَأْذِنُ فِيهَا
نَصَبٌ وَلَا يَسْتَأْذِنُ فِيهَا الْغُوبُ ﴿٣٥﴾

Quraanka Eebaa u waxyooday Nabiga Maxamed ah (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waana xaq sugan oo u rumayn wixii xaqaa ahaa ee ka horreeyay, waxaana dhaxal u helay kitaabkaas addoomada Eebe kooda yardambaabay, kooda dhexdhexaystay iyo kooda khayrka ku hanuunay, arrintaasuna waa deeq Eebe oo wayn, waxayna gali dhamaantood Jannooyin lagu nagaado ooy ku dhex xidhan dhar sharaf leh ooy Eebe ku mahdin, walbahaarna uu ka dheereeyay dajiyayna guri aan dhib iyo daal midna lahayn (jannada), Dabaraani wuxuu wariyay ibnu Cumar inuu yidhi Rasuulkii Eebe Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee: Ruuxa ashahaata kuma cidloobo geerida, Qarbiga iyo soobixinta midna. Faadhir (31-35).

36. Kuwii gaalobay waxay mudan naarta Jahannamo, laguma xukumo geeri oy dhintaan, lagamana fududeeyo Cadaabkeeda, saasaana ku abaal mari-naa mid kastoo gaalimo badan.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا لَهُمْ نَارُ جَهَنَّمَ لَا يُقْضَىٰ عَلَيْهِمْ
فِي سَمُورَةٍ أَوْ لَحْمِ مِثْقَلٍ مِنْ عَذَابِهَا كَذَلِكَ نَجْزِي
كُلَّ كَافِرٍ ﴿٣٦﴾

37. Waxay ku qaylyi dhexdeeda Ee-

وَهُمْ يَصْطَرِحُونَ فِيهَا رَبَّنَا أَخْرِجْنَا نَعْمَلْ صَدَقَاتٍ

boow naga bixi aan camal fiican oo kaan sameynjirray ka duwan fallee, miyaanaan idin cimri siin muddo uu wax ku xusuusto ruuxii wax xusuusan oosan idiin imaanin dige (Nabiga) ee dhadhamiya gaaloy (ciqaabta) uma sugnaanin daalimiin gargaaree.

38. Eebe wuxuu ogyahay waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, wuxuuna ogyahay waxa laabta (Qalbiga) ku sugan.

39. Eebe waa kan idinka dhigay kuwo dhulka iska badala, ruuxii gaaloobase gaalnimadiisu isagaydhibi, Gaaladana uma kordhiso gaalimadoodu Eebahood agtiisa cadho mooyee, umana kordhiso gaalada gaalnimadu khasaaro mooyee.

Had iyo jeer Quraanku wuxuu isla xiihiidhiyaa xaalka kuwa wanaagga fala iyo kuwa xumaanta sameeya, iyo waxa mid kasta loo darbay, aayadahanna waxaysheegi inay gaalo usugnaatay Naar ayan ka dhimanayn lagana fududaynayn, waana abaalka gaalimabadane oo dhan, qaylo iyo Eeboow Naarta naga bixi aan wanaag falee wax matarto markaas oo kale, maxaa yeelay cimri wax lagu xusuusto waa la siiyay udigana wuu u yimid, Eebana wax walba waa ogyahay isagaana dhulka ku kala badala dadka, gaalimo iyo Xumaanna waxaan cadho Eebe iyo khasaare ahayn ma kordhiso, wuxuu yidhi Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe waa u dhameeyay cudurdaar ruuxuu dib udhigay intuu ka gaadho lixdan sano. Waxaa wariyay Bukhaari. Faadhir (36-39).

40. Ka warrama shariigyada aad baryeysaan ood (caabudaysaan) Eebe ka sokow, i tusiya waxay abuureendhulka, ama wadaag ah oy ku leeyihiin samooyinka, mise waxaan siinay Kitaab oo ay xujeysan, saas ma aha ee gaalada qaarkood qaar uma yabooho waaxaan Dhagar ahayn.

41. Eeba ka haya Samooyinka iyo dhulka inay zuulaan (oo tagaan), haday zuulaanna waxaan Eebe ahayn oo qaban ma jiro, Eebena waa dulbadane dhaafid badan.

42. Waxay ugu dhaarteen Eebe dhaar adag hadduu uyimaado udige inay

عَبْرَ الَّذِي كُنَّا نَعْمَلُ أَوْ لَمْ نَعْمَلْ مَا يَتَذَكَّرُ فِيهِ مَنْ تَذَكَّرَ وَجَاءَ كَرُمَ النَّذِيرِ فَذُوقُوا فَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ نَصِيرٍ ﴿٣٧﴾

إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ غَيْبِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ إِنَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿٣٨﴾

هُوَ الَّذِي جَعَلَ لِكُلِّ شَيْءٍ فِي الْأَرْضِ قَدْرًا مَعْلُومًا لَكُمْ فَذُوقُوا عَذَابَ الْكَافِرِينَ وَلَا يَزِيدُ الْكَافِرِينَ كُفْرَهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ إِلَّا أَمَقَاتًا وَلَا يَزِيدُ الْكَافِرِينَ كُفْرَهُمْ إِلَّا أَحْسَارًا ﴿٣٩﴾

قُلْ أَرَأَيْتُمْ شُرَكَاءَ كُمُ الَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ أَرُونِي مَا ذَاتُ حَقِّهِمْ مِنَ الْأَرْضِ أَمْ لَهُمْ شِرْكٌ فِي السَّمَوَاتِ أَمْ آتَيْنَهُمْ كِتَابًا فَهُمْ عَلَى بَيِّنَةٍ مِنْهُ بَلْ إِنْ يَعِدُ الظَّالِمُونَ بَعْضُهُمْ بَعْضًا إِلَّا غُرُورًا ﴿٤٠﴾

﴿٤١﴾ إِنَّ اللَّهَ يُمَسِكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ أَنْ تَزُولَا وَلَئِنْ زَالَتَا إِنْ أَمْسَكَهُمَا مِنْ أَحَدٍ مِنْ عِبَادِهِ إِنَّهُ كَانَ حَلِيمًا غَفُورًا ﴿٤٢﴾

وَأَقْسَمُوا بِاللَّهِ جَهْدَ أَيْمَانِهِمْ لَنْ جَاءَهُمْ نَذِيرٌ لَكُونُوا

noqdaan kuwa ka hanuunsan (ka toosan) umadaha kale, markuu uyimid digihiina uma siyaadinin waxaan carar ahayn.

43. isku kibrin dhulka iyo dhagar xun darteed, dhagarna xumaan waxaan ahayn ehelkiisa kuma dhaco ee miyaad sugaysaan waxaan wadadii kuwii hore ahayn, mana helaysid sunnada Eebe wax badala, ma helaysid sunnada Eebe wax wareejiya.

Gaaladu ma keeni karaan wax xujo ah oo kutusin toosnida waxay caabudi oo Eebe ka soo hadhay, waxay sheegi ama caabudina waa been aan wax ka jirin waxaase xaqah Eebaha cirka iyo dhulka haya sugayna, gaaladii quresheedna in kastooy ku dhaaran jireen in hadii Nabi loo soo diro ay rumayn hadana markuu Nabigu xaq ula yimid way beeniyeen isla wayni iyo dhagar darteed dhagarna ruuxeday halaagtaa, taasina waa jidka Eebe iyo sunnadiisa waxbadali kara ama leexin karana majiro. waxaa sugnaatay in Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisaha yeelee) uu yidhi: Eebe sareeye ma seexo mana haboona inuu seexo, qaybna wuu ridaa midna wuu koryeelaa, waxaana u kora camalka Habeenka Maalinta ka hor, ka Maalintiina Habeenka ka hor, waxaana ku xijaaban Nuur (Bukhaari iyo Muslim). Faadhira (40-43).

44. Miyeyna ku soconin dhulka ooyna dayeeynin siday noqotay cidhibtii kuwii ka horreeyey gaaladii Makaad, waxay ahaayeen kuwo ka xoogbadan, Eebana wax ku cajisiya (daaliya) ma jiro Samooyinka iyo dhulka dhexdooda midna, waana oge wax walba kara.

45. Hadduu Eebe u qaban dadka waxay kasbadeen (oo xumaan ah) kagama tageen dhulka korkiisa waxsocda, laakiin wuxuu dib ugu dhigi tan iyo muddo magacaaban, marka ajashoodu (Geeridoodu) timaadana Eebe addoomadiisa wuu arkaa.

Waxaa haboon in lagu waano qaato maridda dhulka, si loo ogaado kuwii beeniya Nabiyaada iyo xaqii iyo siduu Eebe ku falay, cidhibtoodiina noqotay halaag iyagoo xoog, xoolo, Caruur iyo tiraba is bidayay, waxaasina wax uguna tarin cadaabkii Eebe iyo ciqaabtiisii midna, Eebana waa dulbadane haduu sida loo dambaabi wax u ciqaabana waxba kuma reeben dhulka korkiisa wuxuuse la sugi xisaabta iyo abaal marinta muddo iyo maalinta Qiyaame, ee ruux walba Lakulmi abaalkiisa wax Eebe ka qarsonna uusan jirin. Faadhira (44-45).

أَهْدَىٰ مِن إِيحَىٰ ۖ فَهَلْ جَاءَهُمْ نَذِيرٌ
مَا زَادَهُمْ إِلَّا نُفُورًا ﴿٤٣﴾

أَسْتَكْبَرُوا فِي الْأَرْضِ وَمَكْرُ السَّيِّئِ وَلَا يَحْسِبُونَ
الْمَكْرَ السَّيِّئَ إِلَّا بِأَهْلِهِ ۚ هَلْ يَنْظُرُونَ إِلَّا
سُنَّتَ الْأَوَّلِينَ ۚ فَلَنْ نَجِدَ لِسُنَّتِ اللَّهِ تَبْدِيلًا
وَلَنْ نَجِدَ لِسُنَّتِ اللَّهِ تَحْوِيلًا ﴿٤٤﴾

أَوَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الَّذِينَ
مِن قَبْلِهِمْ ۚ وَكَانُوا أَشَدَّ مَقْرَفَةً ۚ وَمَا كَانَ اللَّهُ
لِيُعْجِزَهُ مِن شَيْءٍ فِي السَّمَاوَاتِ وَلَا فِي الْأَرْضِ ۚ إِنَّهُ
كَانَ عَلِيمًا قَدِيرًا ﴿٤٥﴾

وَلَوْ يُؤَاخِذُ اللَّهُ النَّاسَ بِمَا كَسَبُوا مَا تَرَكُوا
عَلَىٰ ظَهْرِهِمَا مِن دَابَّةٍ وَلَا كُنْ يُؤَخَّرُهُمْ
إِلَّا أَجَلٍ مُّسَمًّى ۚ إِذَا جَاءَ أَجَلُهُمْ لَا يَأْتِ
اللَّهُ كَانَ وَعْدُهُ بَصِيرًا ﴿٤٦﴾

Suurat Yaasiin

سُورَةُ يُسِّ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Waxay ku tusin mucjisada Quraanka).

بِسْمِ ①

2. Quraanka xigmada leh yaan ku dhaartaye.

وَالْقُرْآنِ الْحَكِيمِ ②

3. Nabiyoow waxaad ka mid tahay kuwa la diray (Rasuulada).

إِنَّكَ لَمِنَ الْمُرْسَلِينَ ③

4. Jid toosanna waad ku sugan tahay.

عَلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ④

5. Quraankuna waa soo dajinta Eebaha adkaada ee naxariista.

تَنْزِيلَ الْعَزِيزِ الرَّحِيمِ ⑤

6. inaad ugu digto qoom aan loo digin Aabayaalkood oo halmaansan.

لَسْتَ بِذَرِّ قَوْمٍ أَتَدْرَأُ أَمَا أَبَاؤُهُمْ فَهُمْ غَافِلُونَ ⑥

7. Dhab ahaanna waxaa ugu waajibay badankoodo (ciqaab) mana rumeeyaan xaqa.

لَقَدْ حَقَّ الْقَوْلُ عَلَى الَّذِينَ هُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ⑦

Eebe wuxuu ku dhaartay Quraanka xakiimka ah in Nabiga laga soodiray xagga Eebe loona wax yooday xaqa, jidtoosana uu ku sugan yahay, si Quraanka Eebe ku soo dajiyay uu u gaadhsiyo dadka iyo gaaladii aan wax xaqa usheega loo bixinin dhawaanahan, badankoodna halaagsameen Naaruna u waajibtay kuna dhiman gaalnimo Eebana ma dhuminin ee iyagaa madax adaygay xaqana diiday. Ibnu xibaan wuxuu ka wariyay Jundub Binu cabdulaahi in Rasuulkii Eebe yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe kor kiisa ha yeelee): Ruuxii akhriya yaasiin Habeen Eebe dartiis waa loo dambi dhaafi. (xadiithku ma ansixin).

Markalana wuxuu yidhi Nabigu: Waxaan jeclaan lahaa inay ahaato qalbiga ruuxkasta oo ummadayda ah. waxaa wariyay Bazaar. Yaasiin (1-7).

8. Annagaa yeelay cunahooda Bir waxayna qaban tan iyo gadhka Madaxayna kor u taagi (dhibaato darteed).

إِنَّا جَعَلْنَا فِي أَعْيُنِهِمْ أَغْلَالَ فَبِهِ إِلَى الْأَذْقَانِ

فَهُمْ مُقْتَمِحُونَ ⑧

9. Waxaana yeelay hortooda jidaar gadaashoodana jidaar waana indha tiray waxna ma arkaan.

وَجَعَلْنَا مِنْ بَيْنِ أَيْدِيهِمْ سَدًّا وَمِنْ خَلْفِهِمْ سَدًّا

فَأَعْيُنُهُمْ لَمْ تَبْصُرْ ⑨

10. waxaa isku mid ah hadaad digto iyo hadaadan udigin (marna) ma ru-meeyaan.

وَسَوَاءٌ عَلَيْهِمْ أُنذِرْتَهُمْ أَمْ لَمْ تُنذِرْهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٥﴾

11. Waxaad un u digi (ooy anfici digidu) Ruxii raaca Quraanka oo Eebe ka yaaba isagoon arkayn, uguna bishaaree dambi dhaaf iyo ajir wanaagsan.

إِنَّمَا تُنذِرُ مَنِ اتَّبَعَ الذِّكْرَ وَخَشِيَ الرَّحْمَنَ الْعَلِيمَ فَبَشِّرْهُ بِمَغْفِرَةٍ وَأَجْرٍ كَرِيمٍ ﴿١٦﴾

12. Annaagaa nooleyna wixii dhintay, waana qornaa waxay hor marsadeen iyo raadkoodiiba, wax walbana wa-xaan ku koobnay Kitaab muuqda.

إِنَّا نَحْنُ مُخِي الْمَوْتِ وَكَنتُمْ مَا قَدَّمُوا وَآءِ انذرتهم
وَكُلَّ شَيْءٍ أَحْصَيْنَاهُ فِي إِمَامٍ مُّبِينٍ ﴿١٧﴾

Xaq diidayaashu ma doonayaan hanuunka Eebe, waxayna la mid yihiin ruux luquntiisa iyo gacmihiisa laysku xidhay oo madaxa kor u taagi, amadarbi lagu dayray, ama indhihiisa la daboolay, haddii wax loosheego iyo haddii kalana Waa isku mid oo xaqa ma rabaan, waanadana waxaa ku intifaaci ruuxii Quraanka raaci oo Eebe ka yaabi, wuxuuna Eebe ugu bishaareeyay kuwaas dambidhaaf iyo ajri wayn, maxaa yeelay Eebaha awooda leh yey ka yaabeen iyagoon arkeynin, Eebahaas waxna nooleeya wax kastana Kitaab ku kulmiya.

Nabiguna wuxuu yidhi: ibnu aadanku hadduu dhinto wuu go'aa camalkiisu saddex mooyee: Cilmi lagu intifaaco, Ilmo fiican oo uduceeya, iyo Sadaqo socota gadaashiis. waxaa wariyay Muslim. Yaasiin (8-12).

13. Uga yeel tusaale asaxaabtii magaaladii markay uyimaadeen Rasuulladii (loo soo diray).

وَأَضْرِبْ لَهُمْ مَثَلًا أَصْحَابَ الْقَرْيَةِ الَّتِي آذَيْنَاهَا
الْمُرْسَلُونَ ﴿١٨﴾

14. Markaan u diray xagooda labo, ooy beeniyeen, markaas aan ku xoojinay mid saddexaad, oy dhaheen idinkaa naloo kiin soo diray.

إِذْ أَرْسَلْنَا إِلَيْهِمُ اثْنَيْنِ فَكَذَّبُوهُمَا فَعَبَّوْا بِآيَاتِنَا
فَقَالُوا إِنَّا إِلَهُكُم مُّرْسَلُونَ ﴿١٩﴾

15. Waxayna dhaheen (gaaladii) idinku ma tihidiin waxaan bashar (dad) nala mid ah ahayn, Eebaha Raxmaan ahna waxba ma soo dajinin, idinkuna wa-xaan been ahayn masheegaysaan.

قَالُوا مَا أَنتم إِلَّا بَشَرٌ مِثْلُنَا وَمَا أَنزَلَ الرَّحْمَنُ مِن
شَيْءٍ إِنْ أَنتم إِلَّا لَاتُكذِّبُونَ ﴿٢٠﴾

16. waxay dhaheen (Rasuuladii) Eebahannaagay in naloo kiin soodiray.

قَالُوا رَبُّنَا يَعْلَمُ إِنَّا إِلَهُكُم مُّرْسَلُونَ ﴿٢١﴾

17. Korkannagana ma aha waxaan gaadhsiin cad ahayn.

وَمَا عَلَيْنَا إِلَّا الْبَلَاغُ الْمُبِينُ ﴿٢٢﴾

18. Waxay dhaheen (gaaladii) waan idin baasaysannay, haddaydaan joogin

قَالُوا إِنَّا نَطَّعْتُمْ تَأْتِيكُمْ كَلِمَاتُهَا لَئِن لَّمْ تَنْتَهُوا لَنَرْجِمَنَّكُمْ

waan idin dhagaxyeynaynaa, waxaana xagganaga idinka taaban caddab daran.

وَلَيَسَّئَلَنَّكُمْ مِنَّا عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٨﴾

19. Waxay dhaheen Rasuulladii baaskiinu wuu idinla joogi, haddii laydin waaniyo (Miyuubaasku idinlajiri) waaxaadse tihiiin qoon xadgudbay.

قَالُوا أَطَّلَعْنَاكُمْ مَعَكُمْ أَيَّنَ دُكْرْتُمْ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ مُّسْرِفُونَ ﴿١٩﴾

Gaaladii Nabiga beenisay wax badan yuu Eebe tusaale u sameeyay, halkanna wuxuu ka qisooday magaalo umadihii hore ah oo Eebe u soo diray Rasuulo laba ah, markii la beeniyeyna mid saddexaad lagu xoojiyay, hase yeeshee ay wada beeniyeen iyagoo sheegay inaan Eebe wax ku soo dajinin, Rasuuladuna ay ku dhaheen Eebaa og in naloo kiin soo diray waxaana digniin iyo gaadhsiin cad ahayna nama saara, Ibnu cabaas wuxuu sheegay inay ahayd Magaaladaasu Andaakiya oo gaal xukumi jiray. Yaasiin (13-19).

20. Waxaa ka yimid Magaalada dhankeeda fog nin dagdagi (ordi) wuxuuna ku yidhi qoomkayow raaca rasuullada.

وَحَآءَ مِن أَقْصَا الْمَدِينَةِ رَجُلٌ يَّسْعَى قَالَ يَنْفَعُوكُمْ أَتَيْتُمُوا الْمُرْسَلِينَ ﴿٢٠﴾

21. Raaca cid aan idin warsanayn ujuuro, oo hanuunsan.

أَتَيْتُمَا مَنْ لَا يَنْفَعُكُمْ أَجْرًا وَهُمْ مُّهِتَدُونَ ﴿٢١﴾

22. Maxaanan u caabudaynin Eebihii i abuuray xagiisana laydiin celin.

وَمَا لِيَ لَا أَعْبُدُ الَّذِي فَطَرَنِي وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٢٢﴾

23. Miyaan ka yeelan wax ka soo hadhay ilaahyo hadduu Eebaha Raxmaan ah dhib ila doono ayan wax iitareyn shafeecadoodu waxba ayan i korinayn.

أَفَأَنْتُمْ مِّن دُونِهِ ءَاءَ إِلَهَةٍ إِن يُرْدِنَ الرَّحْمَنُ يَضْرِبْ لَهَا تَغْفِي عَنِّي شَفَعَتُهُمْ شَيْخًا وَلَا يُقْدُونَ ﴿٢٣﴾

24. Markaas waxaan ku sugnaan baadi muuqata (cad).

إِنِّي إِذَا لَفِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ ﴿٢٤﴾

25. Anigu waxaan rumeeyay Eebehiin ee maqla.

إِنِّي ءَأَمَنْتُ بِرَبِّكُمْ فَأَسْمَعُونَ ﴿٢٥﴾

26. Waxaa lagu yidhi gal jannada wuxuuna yidhi shallaytadaydee qoomkaygii muu ogaado.

فِيَلْ أَدْخُلَ الْجَنَّةَ قَالَ يَا لَيْتَ قَوْمِي يَعْلَمُونَ ﴿٢٦﴾

27. Waxa Eebe iigu dambi dhaafay iigana yeelay kuwo la karaameeyey.

يَعَاغَفِرْ لِي رَبِّي وَجَعَلَنِي مِنَ الْمَكْرُمِينَ ﴿٢٧﴾

28. Kuma aanaan dajinin qoomkiisii gadaashiis Januud samada ka timid, mana aanaan ku soo dajinin.

* وَمَا أَنْزَلْنَا عَلَى قَوْمِهِ مِن بَعْدِهِ مِن جُنْدٍ مِّنَ السَّمَاءِ وَمَا كُنَّا مُنْزِلِينَ ﴿٢٨﴾

29. Waxaan qaylo Kaliya ahayna lagu-
ma halaagin oo markaas ay bakhtiyeen
(halaagsameen).

إِنْ كَانَتْ إِلَّا صِبْغَةً وَجِدَةً فَإِذَا هُمْ خَامِدُونَ ﴿٣١﴾

Had iyo jeer markii la arko dad xun waxaa la arkaa oo kale dad wanaagsan sida ninka xaqa rumeeyay ee aayadahani ka warrami iskuna dayay inuu hanuuniyo qoomkiisii, isagoo usheegi in Eebe kaliya muto in lacaabudo, waxa ka soo hadhayna ayna wax la caabudo ahayn iyo kuwo wax tari midna, markuu xaalkii ku adkeeyayna ay dileen, markaas Eebe Janno ugu abaalguday, isna markaas uu bishaaraystay isagoo dhihi may ogaadaan qoomkaygii sida Eebe ii wanaajiyay iigana mid dhigay kuwa lasharifay, kadibna xaalkii wuxuu ku dambeeyay in lahalaagay gaaladii. taasina waa abaalka xaquidiyaasha. Qataade wuxuu yidhi: Halla kulmin mu'min adoon u nastee xaynaynin oo Khayaani. Yaasiin (20-29).

30. Nidaamo (Qoomamo) yaa u su-
gnaatay addoomada Rasuulkii u yimaa-
daba waxay ahaadaan kuwo ku jees
jeesa.

يَحْسِرَةٌ عَلَى الْعِبَادِ مَا يَأْتِيهِمْ مِنْ رَسُولٍ
إِلَّا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ ﴿٣٢﴾

31. Miyayna arkeyn intaan halaagnay
hortood quruumo, aan xagooda usoo
noqonayn.

أَلَيْسَ لَكُمْ أَهْلِكُمْ قَبْلَهُمْ مِنَ الْقُرُونِ أَنَّهُمْ إِلَيْهِمْ
لَا يَرْجِعُونَ ﴿٣٣﴾

32. Dhammaanna waxaa lagu soo
kulmin agtannada.

وَإِنْ كُلُّ لَمَنَّا جَمِيعٌ لَدَيْنَا مُخَصَّرُونَ ﴿٣٤﴾

33. Waxaa calaamo u ah dhulka dhinta
(abaarooma) oo noolayno kana soo
bixino midho ay wax ka cunaan.

وَأَيُّ آيَةٍ لَهُمْ فِي الْأَرْضِ الْمَبِيئَةِ أَحْيَيْتُهَا وَأَمْرَجْتُمَا مِنْهَا
حَبَابًا فَهِنَّ يَأْكُلْنَ لَوْتَ ﴿٣٥﴾

34. Waxaana yeellay dhexdeeda beero
Timir iyo Cinabyo ah, waxaana ka
dillaacinay dhexdeeda ilo (Biyo ah).

وَجَعَلْنَا فِيهَا حَنْتٍ مِنْ نَخِيلٍ وَأَعْنَابٍ
وَفَجَّرْنَا فِيهَا مِنَ الْعُيُونِ ﴿٣٦﴾

35. Si ay u cunaan midhihiisa iyo waxay
camal faleen gacmahoodu, miyeyna
mahdinaynin Eebe.

لِيَأْكُلُوا مِنْ ثَمَرِهِ وَمَا عَمِلَتْهُ أَيْدِيهِمْ أَفَلَا
يَشْكُرُونَ ﴿٣٧﴾

36. Waxaana nasahana Eebaha abuuray
noocyada dhamaanteed oo ah waxa
dhulku soo dhaliyo iyo naftoodaba iyo
wax ayna ogayn.

سُبْحَانَ الَّذِي خَلَقَ الْأَرْوَاحَ فِي بَاطِنِ الْأَعْيُنِ وَمَا يَشْكُرُ
الْأَرْضُ وَمَنْ أَنْفُسِهِمْ وَمَا لَا يِقْتُلُونَ ﴿٣٨﴾

Dadka waxaa ku badan kuwo khasaaray oo xumaan iyo xaq beenin ku madax taaga Eebana in kastoo uu dul badan yahay hadana daalimiinta wuu halaagaa, isagoo ruux walba la hor gayn Eebihis, cidii waantoobina waxaa waano ugu filan dhulka abaarooma ee Eebe rookba ku shubo ka dibna midho, Doog iyo khayr badan ka socbaxo, waxaana xumaan ka fog Eebaha abuuray noocyada dhamaantood. Yaasiin (30-36).

37. Waxaa dadka calaamo ugu filan habeenkaan Maalinta ka soo siibno, oo markaas ay mugdi galaan Dadkii.

وَأَيُّ لَهْمٍ أَلَيْلٌ تَسْلَخُ مِنْهُ النَّهَارُ فَإِذَا هُم مُّظْلِمُونَ ﴿٣٧﴾

38. Qorraxduna waxay ku orodaa meelay leedahay, taasina waa qadaraad da Eebaha adkaada ee waxwalba og.

وَالشَّمْسُ تَجْرِي لِمُسْتَقَرٍّ لَهَا ذَلِكَ تَقْدِيرُ الْعَزِيزِ الْعَلِيمِ ﴿٣٨﴾

39. Dayaxana waxaan uqadaray (uyee-lay) meelo uu ku hoydo intuu ka noqdo sida laan gabowday oo kale.

وَالْقَمَرَ قَدَّرْنَاهُ مَنَازِلَ حَتَّىٰ عَادَ كَالْعُرْجُونِ الْقَدِيمِ ﴿٣٩﴾

40. Qorraxdana uma suurowdo inay haleesho Dayaxa Habeenkana uma suurowdo inuu maalinta ka hormaro, mid kastana falagiisuu dhex dabaalan.

لَا الشَّمْسُ يَنْبَغِي لَهَا أَنْ تُدْرِكَ الْقَمَرَ وَلَا اللَّيْلُ سَابِقُ النَّهَارِ وَكُلٌّ فِي فَلَكٍ يَسْبَحُونَ ﴿٤٠﴾

41. Waxaa calaamo ugu filan dadka inaan ku xambaaray aabayalkood Doontii buuxday.

وَأَيُّ لَهْمٍ أَنَا حَمَلْنَا ذُرِّيَّتَهُمْ فِي الْفُلْكِ الْمَشْحُونِ ﴿٤١﴾

42. Waxaana uga abuuraynaa iyada oo kale waxay Koraan.

وَخَلَقْنَا لَهُمْ مِنْ مِثْلِهِ مَا يَرْكَبُونَ ﴿٤٢﴾

43. Hadaan doonana waan maanshey-naa wax u gargaarana mahelaan lamana koriyo.

وَأِنْ نَشَأْغِرْهُمْ فَهُمْ فَلَصْرِيحٍ لَهُمْ وَلَا هُمْ يُنْقَدُونَ ﴿٤٣﴾

44. Naxariis Eebe iyo uraaxayn tan iyo wakhti mooyee.

إِلَّا رَحْمَةً مِنَّا وَمَتَاعًا إِلَىٰ حَبِيبٍ ﴿٤٤﴾

Runtu waa in habeenka, Maalinta, Qoraxda, dayaxa iyo khalqiga kalaba yihiin calaamooyinka ku tusin jirida Eebe iyo awoodiisa, mid walbana wuxuu u shaqeeyaa sidii Eebe ugu talagalay, mid kan kale dhaafi ama haleelina Ma jiro, wuxuuna mid walbana dhex dabaalan falagiisa, waxaa kale oo calaama u ah Eebe awoodiisa siduu Badda usakhiray si doomuhu iyo maraakiibtu udhex socdaan, haduu Eebe doonana uu karo inuu maasheeyo kuna dajiyo hada, hasa yeeshee wax walba wakhti buu u yeelay. Ibnu cabaas wuxuu yidhi: falagu waa sida maxaarka dharka lugu tolo Meesha waregsan ee dunta Looga wareejiyo ayuu Falagu u eg yahay. Yaasiin (37-44).

45. Marka gaalada lagu dhaho ka dhowrsada waxa hortiina ah iyo waxa gadaashiina ah waxaad udhawdihiiin in laydiin naxariistee (ma maqlaan).

وَأَذِيقْ لَهُمْ أَلْمَامَيْنِ أُنْدِيكُومًا وَمَاخَلْفَكُومًا لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٤٥﴾

46. Aayad kasta oo u timaada oo ka mid ah aayaadka Eebahood way ka jeedsadaan.

وَمَا تَأْتِيهِمْ مِنْ آيَةٍ مِنْ آيَاتِ رَبِّهِمْ إِلَّا كَانُوا عَنْهَا مُعْرِضِينَ ﴿٤٦﴾

47. Marka lagu dhaho bixiya waxa Eebe idinku arzuqay wax ka mid ah waxay ku dhahaan kuwa gaaloobay kuwii rumeeyay ma waxaan quudinaynaa cid hadduu doono Eebe uu quudin lahaa, waxaan baadi cad ahayna kuma sugni-din.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ أَنْفَعُوا أَمْمَارَ رَبِّكُمْ أَفَلَا تَكْفُرُونَ
لِلَّذِينَ آمَنُوا أَنْطَعِمُ مَنْ لَوْ يَشَاءُ اللَّهُ أَنْطَعِمَهُ وَإِنْ
أَنْتُمْ إِلَّا فِي ضَلَالٍ مُبِينٍ ﴿٤٧﴾

48. Waxay odhan gaaladu waa goorma (waqtiguu dhici) yaboohaas (Qiyaamaadu) hadaad run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَى هَذَا الْوَعْدِ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٤٨﴾

49. Ma sugaayaan (gaaladu) hal qaylo mooyee oo qabanaysa iyagoo doodi.

مَا يَنْظُرُونَ إِلَّا الصَّيْحَةَ وَوَجِدَهُ تَأْخُذُهُمْ وَهُمْ
يَخِصِّمُونَ ﴿٤٩﴾

50. Mana karaan dardaaran ehelkoo-diina uma soo noqdaan.

فَلَا يَسْتَطِيعُونَ تَوْصِيَةً وَلَا إِلَىٰ أَهْلِهِمْ
يَرْجِعُونَ ﴿٥٠﴾

Ruuxa caqliga leh waa inuu udarbado in laga abbalmarin wax kastoo uu layimaado, hase yeeshee gaalada caqliga daran iyo wixii lamid ahba waxba uma aabayeelaan marka arintaas la farana dhag jalaq uma siiyaan, waxkastoo xaqahna way ka jeedsadaan, waxa Eebe ugu nicmeeyayna way ku bakhaylaan, waxayna, ku jawaabaan xumaan, jeedsii iyo qiyaamo inkir, maxayse fali markay hal qalyo oo halaagta iyo geeridu utimaado iyagoo muran iyo dood ku jira, oo markaas aan dardaaran iyo ku noqosho guri midna u suuroobaynin. Yaasiin (45-50).

51. Suurkaa la afuufi markaasaa dadku qubuurahooda xagga Eebahood uga soo dagdagi.

وَيُفْجَعُ فِي الصُّورِ فَإِذَا هُمْ مِنَ الْأَجْدَاثِ إِلَىٰ رَبِّهِمْ
يَنْسَلُونَ ﴿٥١﴾

52. Iyagooy dhihi gaaladu waan kha-saarnaye yaa naga soobixiyey meeshaan jiiifnay (qabrigii) taasina waa wixii Eebaha Raxmaan ah yaboohay Rasuuladuna ku run sheegeen.

فَأُولَٰئِكَ نَبِئْنَا مَنْ يَمْزِقُونَ وَمَنْ يَمْزِقُونَ
أَلَمْ نَحْمَدْكَ وَنُقَدِّسُكَ هَذَا مَا وَعَدَ
الرَّحْمَنُ وَصَدَقَ الْمُرْسَلُونَ ﴿٥٢﴾

53. Waxaan qalyo kaliyo ahayn ma aha, markaasaa dhamaantood agtanada lagu soo kulmin.

إِنَّكَ أَنْتَ إِلَّا الصَّيْحَةَ وَوَجِدَهُ تَأْخُذُهُمْ جَمِيعٌ لَدَيْنَا
مُحَضَّرُونَ ﴿٥٣﴾

54. Maantana (qiyaamada) lagama dul-miyo nafna waxba, laydiin kana abbalmarin maayo waxaad camal falayseen mooyeen.

فَالْيَوْمَ لَا تَنْظُرُهُمْ تَنظُرًا وَلَا يُجْزَوْنَ إِلَّا مَا
كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٥٤﴾

55. Asaxaabta Jannada (ehelkeeda) Maantaa waxay ku shuqloonyihiin Nic-mo iyo farax.

إِنَّ أَصْحَابَ الْجَنَّةِ الْيَوْمَ فِي شُغْلٍ فَكِهِونَ ﴿٥٥﴾

56. Iyaga iyo haweenkooduba waxay ku sugnaan hadh, waxayna ku dangiigsanaan sariiro (sare). ﴿٥٦﴾ هُمْ وَأَزْوَاجُهُمْ فِي ظُلُمٍ عَلَى الْأَرْبَابِكُمْ مَتَكُونُونَ

57. Waxayna dhexdeeda ka heli faakhad, waxayna heli waxay dalbaan. ﴿٥٧﴾ لَهُمْ فِيهَا قَائِكِهَةٌ وَلَهُمْ مَا يَدْعُونَ

58. salaan Eebaha Naxariista xagiisa ka timidna way heli. ﴿٥٨﴾ سَلِّمْ قَوْلًا لِمَنْ رَبِّ رَجِيمٍ

Qiyaamadu waa xaq sugan, wayna imaan, Dadkuna qubuurahay ka soo bixi, iyadow kuwa xun dhihi shaleytee yaa naga soobixiyey qabrigii aanjiifnay, waxaana loogu jawaabi waa waqtigii Eebe yaboohay Rasuuladuna ku run sheegeen, soo kulmintuna Eebe kuma cusla ee hal qaylo oo malag ku qaylo yaa ku filan, Eebana cidna madulmiyo, ruux walbana waxaa laga abaal marin wuxuu camal fashay, ehelo jannahana waxay ku nasan maalintaas Hoos, Sariiro iyo cunno raaxa leh, xagga Eebana waxaa uga iman salaan nabad galyo.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayelee) Ma jiraa cid u xanjeeran Jannada, Jannadu khatar ma leh, Eebaha Kacbaadee nuurbaa kuligeed ka ifi, reyxantuna way gilgilan, Guryana way kadhisiyihiiin waxaa wariyey Ibnu Maajah. Yaasiin (51-58).

59. Soocma maanta danbiilayaalyahow (gaalada). ﴿٥٩﴾ وَأَمْتَدُوا أَيُّومَ أَيُّهَا الْمُجْرِمُونَ

60. Miyaanan idinkula ballamin Bani aadamow inaydaan caabudin Shaydaan, illeen col muuqda yuu idiin yahay. ﴿٦٠﴾ * أَلَمْ نَعْهَدْ إِلَيْكُمْ بَنِي آدَمَ أَنْ لَا تَعْبُدُوا الشَّيْطَانَ إِنَّهُ لَكُمْ عَدُوٌّ مُبِينٌ

61. Ood ani i caabudaan, taasina waa wadada toosna. ﴿٦١﴾ وَإِنِ اعْبُدُونِي هَذَا صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ

62. Dhab ahaan wuxuu udhumiyay (Shaydaan) xaggiina dad badan, miyaydaan wax kasaynin. ﴿٦٢﴾ وَأَلْقَدَ أَصْلَ مِنْكُمْ جِيلًا كَثِيرًا أَفَلَمْ تَكُونُوا تَعْقِلُونَ

63. Tanina waa jahannamadii laydiinku yaboohay. ﴿٦٣﴾ هَذِهِ جَهَنَّمُ الَّتِي كُنْتُمْ تُوعَدُونَ

64. Ee gala Maanta gaalimadinii dar-teed. ﴿٦٤﴾ أَصْلَوْهَا أَيُّومَ يَمَّا كُنْتُمْ تَكْفُرُونَ

65. Maanta waxan daboolaynaa afkooda, waxaana nala hadli gacmahooda waxaana ku marag furi lugahooda waxay kasban jireen. ﴿٦٥﴾ أَيُّومَ نَخْتَعُ عَلَى أَفْوَاهِهِمْ وَكُنَّا أَيْدِيَهُمْ وَنَشْهَدُ أَرْجُلَهُمْ بِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ

66. Haddaan doono waan indha tiraynaa oo markaas ay udag-dagaan wadada, sayse u arki. ﴿٦٦﴾ وَأَوْشَكَ لَطَمَسْنَا عَلَى أَعْيُنِهِمْ فَاسْتَبَقُوا الصِّرَاطَ فَأَنَّى يُبْصَرُونَ

67. Hadaan doonana waan doorinaynaa, mana karayaan tagid iyo soo noqosho midna.

وَلَوْ نَشَاءُ لَمَسَخْنَاهُمْ عَلَىٰ مَكَاتَتِهِمْ فَمَا
اسْتَطَعُوا مُضِيًّا وَلَا يَرْجِعُونَ ﴿٣٧﴾

68. Ruuxaan cimri siinno waxaannu ku gadin abuuridda (waannu tabar yarayn) ee miyaydaan wax kasayn.

وَمَنْ نُعَمِّرْهُ نُنَكِّسْهُ فِي الْخَلْقِ
أَفَلَا يَعْقِلُونَ ﴿٣٨﴾

Maalinta qiyaame waa la kala bixi, Gaaladana meel gaar ah yaa looga sooci mu'miniinta, dadkana wuxuu Eebe warsan inay ballanqaadeen in Eebe la caabudo shaydaana laga digtoonaado, illeen waa colka waxbadan dhumiyee, Gaalana waxay gali Naarta Jahanamo iyagoo la aamusiiday oo gacmahoodu iyo lugahoodu hadli, Eebana hadduu doono dadka wuu indha tiri, hadduu doonana wuu doorin iyagoo sii noqod iyo soo noqod karayn.

Abu hurayre waxaa laga wariyay in Rasuulkii Eebe yidhi (Naxariis iyo Nabadgalayo Eebe korkiisa ha yeelee) Markay Malinta qiyaame tahay Eebe wusuu amraa Jahanamo waxaana ka soo baxa cuno madow oo dhihi: Dambiila yaashow soocma Maanta, waana la kala bixi isagoo la gurguuran. Waxaa sheegay Ibnu Jarir. Yaasiin (59-68).

69. Maanaan barin Nabiga shicirka, Kumana haboona, waxaan (barna) un waano iyo Quraan cad.

وَمَا عَمَلْتَهُ الشِّعْرُ وَمَا يَنْبَغِي لَهُ إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ
وَقُرْآنٌ مُّبِينٌ ﴿٣٩﴾

70. Si uu ugu digo ruuxii nool (xaqa raaci) caddabna ugu sugnaado Gaalada.

لِيُنذِرَ مَنْ كَانَ حَيًّا وَيُحْيِيَ الْقَوْلَ عَلَى
الْكَافِرِينَ ﴿٤٠﴾

71. Miyeyna arkaynin inaan uga abuuray waxaan Sameynay xoolo ay hantaa.

أُولَئِكَ زُورًا إِنَّا خَلَقْنَا لَهُمْ وَمَا عَمِلَتْ أَيْدِيئِنَا أَنْعَمًا
فَهُمْ لَهَا مَلَائِكُونَ ﴿٤١﴾

72. Oon u laylinay, ooy waxna ka Koraan waxna ka cunaan.

وَذَلَّلْنَاهَا لَهُمْ فَمِنْهَا رَكُوبُهُمْ وَمِنْهَا يَأْكُلُونَ ﴿٤٢﴾

73. Waxaana ugu sugan manfacado iyo cabid ee miyayna mahdinaynin Eebe.

وَلَهُمْ فِيهَا مَنَافِعٌ وَمَشَارِبٌ أَفَلَا يَشْكُرُونَ ﴿٤٣﴾

74. Waxay ka yeesheen Eebe ka soke ilaahyaal inay u gargaaraan.

وَأَنْتَحُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ إِلَهَةً لَعَلَّهُمْ
يُنصَرُونَ ﴿٤٤﴾

75. Mana karaan gargaarkooda waxayna uyihii Junuud (askar) kulmisan.

لَا يَسْتَطِيعُونَ نَصْرَهُمْ وَهُمْ لَهُمْ جُنْدٌ
مُّحَضَّرُونَ ﴿٤٥﴾

76. Ee yeyna ku walbahaar galinin hadalkoodu annagaa og waxay qarsan iyo waxay muujinbee.

فَلَا يَخْزِيكَ فَوْهُهُمْ أَنَّا نَعْلَمُ مَا يُبَيِّرُونَ
وَمَا يُعْلِنُونَ ﴿٤٦﴾

Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalayo Eebe kor kiisa hayeelee) Eebe waa ka fogeeyey inuu baro shicir iyo Gabay, ee wuxuu Eebe ku soo dajiyay Quraan xaqaq, si loogu digo ciddii qalbigeedu noolyahay,

Gaaladana uu xujo ugu noqdo. Eebana Nicmooyin badan yuu ugu nicmeeyey dadka Sida Xoolaha oo una laylay si loogu nacfiyo, hase yeeshee dadka badankiis Eebe Kuma mahdinin ee waxay yeesheen Ilaahyaal ay agtuban yihiin oon waxba u tarayn, yaynase ku walbahaar galinin Eebe waa og yahay sirtooda iyo caddankoodde. Rasuulku wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayee lee) inuu ka buuxsamo bagga mid kiin malax yaa ka khayroon inuuka buuxsamo gabay (xun). waxaasheegay Imaan Axmed. Yaasiin (69-76).

77. Miyuusan arag dadku (oo ogayn) Inaan ka abuuray dhibic, markaas uu noqday dood badane cad.

أَوَلَمْ يَرِ الْإِنْسَانُ أَنَّا خَلَقْتَهُ مِنْ نُطْقَةٍ فَإِذَا هُوَ خَصِيمٌ مُبِينٌ ﴿٧٧﴾

78. Wuxuuna noo yeelay tusaale wuuna halmaamay abuurkiisa wuxuuna yidhi yaa noolayn lafo baaliyoobay.

وَصَرَبَ لَنَا مَثَلًا وَنَسِيَ خَلْقَهُ قَالَ مَنْ يُحْيِي الْعِظَامَ وَهِيَ رَمِيمٌ ﴿٧٨﴾

79. Waxaad dhahdaa waxaa noolayn Eebihii ahaysiiyay markii horaba, abuur walbana waa ogyahay.

قُلْ يُحْيِيهَا الَّذِي أَنشأَهَا أَوَّلَ مَرَّةٍ وَهُوَ بِكُلِّ خَلْقٍ عَلِيمٌ ﴿٧٩﴾

80. Eebaha idiinka yeelay geedka caagaan dab, oo markaas aad hursataan.

الَّذِي جَعَلَ لَكُم مِّنَ الشَّجَرِ الْأَخْضَرِ نَارًا فَإِذَا أَنشأْتُم مِّنْهُ نُوقُدُونَ ﴿٨٠﴾

81. Eebaha abuuray Samooyinka iyo dhulka miyuusan karin inuu abuuro isagoo kale, waa karaa, waana abuur badane ogaansho badan.

أَوَلَيْسَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بِقَدِيرٍ عَلَىٰ أَن يَخْلُقَ مِثْلَهُمْ بَلَىٰ وَهُوَ الْخَلَّاقُ الْعَلِيمُ ﴿٨١﴾

82. Amarka Eebena markuu wax inuu abuuro doono waa inuu ku yidhaahdo uun ahaw oo uu ahaado.

إِنَّمَا أَمْرُهُ إِذَا أَرَادَ شَيْئًا أَن يَقُولَ لَهُ كُن فَيَكُونُ ﴿٨٢﴾

83. Waxaa nasahan (xumaan ka fog) Eebaha awooddiisa ku jiro xukunka wax kasta, xaggiisaana laydiin soo celin.

فَسُبْحَانَ الَّذِي يَدْعُوهُ يَمُوتُ كُلُّ شَيْءٍ وَإِلَيْهِ مُرْجِعُونَ ﴿٨٣﴾

Aayadahanu waxay soo dageen markuu gaal la dhihi jiray Ubayi binu khalaf uu u yimid Nabiga (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe hayeelee) isagoo wata lafo duqoobay intuu burburiyayna o dabaysha raaciyay yidhi: Ma waxaadsheegi in tan Eebe soo noolayn, markaasuu Nabigu ku yidhi: Haa wuu kudili Eebe hadana ku soo noolayn Naartana ku galin. Eebaha dadka dhibic ka abuuray ee Geedaha dabka ka ahaysiiyay wax walbana abuuray, Cirkay iyo dhulkuna awoodiisa ku jiraan markuu doonana kudhihi waxaas ahaw markiibana ahaada miyaan karin inuu soo celiyo mar labaad dadka ama ka daali Eebana wuu ka sareeyaa oo ka nasahanyahay xumaan xaggiisaana dhamaan loo noqon ka dibna uu abaal marin cid walba. Yaasiin (77-83).

Suurat As-Saaffaat

سُورَةُ الصَّافَّاتِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Waxaan ku dhaartay) malaa'igta safan.

وَالصَّافَّاتِ صَفًّا ①

2. Iyo tan kaxaysa daruuraha.

فَالرَّجَرِاتِ رَجْرًا ②

3. Iyo tan akhrida Quuraanka.

فَالْقَائِلَاتِ ذِكْرًا ③

4. Ee ilaahiin waa mid (qudha).

إِنَّا إِلَهُكُمْ لَوَاحِدٌ ④

5. Waa Eebaha samooyinka iyo dhulka iyo waxa udhaxeeya, iyo Eebaha qorrax ka soo bixidda.

رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا
وَرَبُّ الْمَشْرِقِ ⑤

6. Annagaa ku qurxinay Samada dhaw quruxda xidiga ah.

إِنَّا رَبُّنَا السَّمَاءَ الدُّنْيَا بِنُورِ الْكَوَكِبِ ⑥

7. Iyo ka dhowrid shaydaan kastoo madax adag.

وَحَفَظًا مِّنْ كُلِّ شَيْطَانٍ مَّارِدٍ ⑦

8. Mana dhagaystaan jameecada sare, (Malaa'igta) waxaana laga soo tuuraa dhan kasta.

لَا يَسْمَعُونَ إِلَى الْمَلَأِ الْأَعْلَى وَيُقَدِّفُونَ مِنْ كُلِّ جَانِبٍ ⑧

9. Iyagoo la eryi oo cadaab joogta ah usugnaaday.

دُحُورًا وَأَلْهَمَ عَذَابٍ وَاصِبٌ ⑨

10. Marka laga reebo mid mid dafa hadalka oo uu raaco danab ifi.

إِلَّا مَن حَظَّفَ النُّظْفَةَ فَأَتْبَعَهُ شَهَابٌ نَّاقِبٌ ⑩

Waxay ku billaabatay suuradu inuu Eebe ku dhaartay Malaa'igta inuu kali yahay iyo samada iyo dhulka iyo wax walba awoodiisa ku jiraan, iyo inuu cirka ku qurxiyay xidigo kana reebay shaydaanka inuu u dhawaado ama waxka dhagaysto, Qataade wuxuu yidhi: -Xiddigaha: waxaa loo abuuray saddex: Shayadiinta oo lagu gano, nuur lagu tooso (oo lagu gato jahooyinka) iyo Quruxda samada dhaw. As-Saaffaat (1-10).

11. Waydii gaalada ma iyagaa ku daran abuuridda mise waxaan abuuray, annagaa ka abuuray dhoobo dhagta.

فَأَسْتَفِيهِمْ أَهْلُهُمْ أَشَدُّ خَلْقًا أَمْ مَن خَلَقْنَا إِنَّا خَلَقْنَا لَهُمْ
مِّنْ طِينٍ لَّازِبٍ ⑪

12. Waxaadse la yaabtay (benintooda) iyaguna way jees jeesi. بَلْ عَجِبْتَ وَيَسْخَرُونَ ﴿١٢﴾
13. Marka la waaniyan ma waantoo-baana. وَإِذَا ذُكِرُوا لِآيَاتِكُمْ كُرُوا ﴿١٣﴾
14. Hadday calaamo arkaana way ku jees jeesaan. وَإِذَا رَأَوْا آيَةً يَسْتَسْخَرُونَ ﴿١٤﴾
15. Waxayna dhahaan kani waxaan sixir cad ahayn ma aha. وَقَالُوا إِن هَذَا إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١٥﴾
16. Waxayna dhahaan ma markaan dhimanoo oon carro noqono iyo lafo yaa nala soo bixin. أَوَدَأْمِتْنَا وَكُنَّا تُرَابًا وَعِظْمًا أَوْ نَأْمَجُورُونَ ﴿١٦﴾
17. Ama aabayaalkannagii hore (iyagana malasocelin). أَوَاءَ آبَاؤُنَا الْأَوَّلُونَ ﴿١٧﴾
18. Waxaad dhahdaa haa waalaydin soo celin idinkoo waliba dullaysan. فُلْغَمَةً وَأَنْتُمْ دَخِرُونَ ﴿١٨﴾
19. Xaaladduna waa uun qaylo kaliya markaas, waxaa soo bixi dadkii oo wax eegi. فَإِنَّمَا هِيَ زَجْرَةٌ وَاحِدَةٌ فَإِذَا هُمْ يَنْظُرُونَ ﴿١٩﴾
20. Waxayna dhihi gaaladii halaagganagee kan waa maalintii abaalmarinta. وَقَالُوا لَوْ نَبِتْنَا هَذَا يَوْمَ الدِّينِ ﴿٢٠﴾
21. Waxaana lagu dhihi kani waa maalintii kala bixinta ee aad beeninjirteen. هَذَا يَوْمَ الْفَصْلِ الَّذِي كُنْتُمْ بِهِ تُكَذِّبُونَ ﴿٢١﴾
22. Kulmiya kuwii daalimiinta ahaa iyo wixii la mid ahaa iyo waxay caabudjireen. * أَحْسَرُوا الَّذِينَ ظَلَمُوا أَزْوَاجَهُمْ وَمَا كَانُوا يَعْبُدُونَ ﴿٢٢﴾
23. Oo Eebe ka soo hadhay, tusiyana jidka Jaxiimo. مِنْ دُونِ اللَّهِ فَأَهْدُوهُمْ إِلَى صِرَاطِ الْحَجِيزِ ﴿٢٣﴾
24. Joojiyana waxbaa la waydiine. وَقَفُّهُمْ إِنَّمَا هُمْ قَسْمُونَ ﴿٢٤﴾
25. (Waxaana lagu dhihi) Maxaad leedihiin oy daan isugu gargaaraynin. مَا لَكُمْ لَا تَنْتَصِرُونَ ﴿٢٥﴾
26. Saas ma aha ee maanta way isdhiibeen. بَلْ هُمْ الْيَوْمَ مُسْتَسْأِمُونَ ﴿٢٦﴾

Eebe kor ahaaye wuxuu faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu gaalada soo bixinta diidan warsado ma iyagaa ka daran khalqiga kale, waxayse ku jawaabeen dafiraad iyo jees jees iyo xumaan, waase la soobixin qiyaamada iyagoo dulaysan, oo calaacali, waxaase loo sheegi inay

tahay maalintii abaalmarinta iyo wax la warsan lana tusi jidka naarta jaxiimo, isagoo is dhiibi Maalintaas, Cumar Binu Khadaab wuxuu sheegay: In saaniga lala kulmin saaniga, kan ribadana kan ribada, kan khamridana kan khamrida. As-Saaffaat (11-26).

27. Wuxuu qaabilay qaarkood qaarki kale iyago wax iswarsan.

وَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ يَتَسَاءَلُونَ ﴿٢٧﴾

28. Waxayna dhaheen kuwii waxraacay (raaciyadii) waxaad ahaydeen kuwo nooga yimaadda xagga midig (wanaaga).

قَالُوا إِنَّكُمْ كُنْتُمْ تَأْتُونَنَا عَنِ الْيَمِينِ ﴿٢٨﴾

29. Waxay dhaheen madaxdii ma aha ee idinkaan mu'miniin ahayn.

قَالُوا بَلْ لَمْ تَكُونُوا مُؤْمِنِينَ ﴿٢٩﴾

30. Wax xoog ah oon idin ku lahayn ma jirin waxaadse ahaydeen qoom xad gudbey.

وَمَا كَانَ لَنَا عَلَيْكُمْ مِنْ سُلْطَانٍ بِئْسَ مَا كُنْتُمْ قَوْمًا طٰغِينَ ﴿٣٠﴾

31. Markaasuu nagu waajibay (nagu rumoobey) hadalkii Eebe (ciqaab) waxaana dhadhaminaynaa (cadaabka).

فَحَقَّ عَلَيْنَا قَوْلُ رَبِّنَا إِنَّا لَأَذِيبُوكُمْ ﴿٣١﴾

32. Markaasaan idin dhuminaa anna-guna waan dhunsanayn.

فَأَعْوَبْتُمْ كَمَا إِنَّا كُنَّا عَوِينُ ﴿٣٢﴾

33. Iyagu maalintaas cadaabkay wadaagi.

فَأَنهَرُوا مِيزِينَ فِي الْعَذَابِ مُشْتَرِكُونَ ﴿٣٣﴾

34. Annaguna saasaan kufallaa dambii-layaasha.

إِنَّا كَذَلِكَ نَفْعَلُ بِالْمُجْرِمِينَ ﴿٣٤﴾

35. Waxayna ahaayeen marka lagu dhaho Eebe mooyee ilaah kale oo xag lagu caabudo majiro kuwa iskibriya.

إِنهْمُ كَانُوا إِذَا قِيلَ لَهُمْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ يَسْتَكْبِرُونَ ﴿٣٥﴾

36. Oo dhaha ma waxaan uga tagaynaa ilaahyadannada gabayaa waalan.

وَيَقُولُونَ إِنَّا لَأَنتَارِكُوا آلَهُمِنَّا إِن شَاءَ رَبِّنَا ﴿٣٦﴾

37. Saas ma aha ee wuxuu la yimid (Nabigu) xaq uuuna rumeeyey Rasuuladii (Eebe soodiray).

بَلْ جَاءَ بِالْحَقِّ وَصَدَّقَ الْمُرْسَلِينَ ﴿٣٧﴾

Aayadahan wuxuu Eebe kusheegay in maalinta Qiyaamaha gaaladu qaarkood qaarka kale dagaali sida madaxda iyo kuwii xumaanta ku raacay, ugu dambeyntana waa in dhamaantood baadi ahaayeen cadaabkana ay ku kulmi mar haday xumaanta ku kulmi jireen, maxaayecalay waxay iska waynaynjireen

marka lagu dhaho Eebe mooyee ilaah kale oo xag lagu caabudo majiro, iyo inay Nabiga xumaan iyo waalli ku sheegaan isagoo xaq iyo rumaynta Rasuuladii Eebe layimid, taasuna waxay muujini in xumaanta iyo fasaadka oo laysku raaco ay sababin calaalac ciqaab Aakhiro. ee waa in wanaaga laysfraa xumaantana laysaga digo. As-Saaffaat (27-37).

38. Idinku (gaaloy) waxaaad dhadha-misaan cadaabka daran (wax xanuu-jiya).

إِنَّكُمْ لَدَائِقُو الْعَذَابِ الْأَلِيمِ ﴿٣٨﴾

39. Waxaan camalkiina ahayna laydin-kama abaal mariyo.

وَمَا تَجْزَوْنَ إِلَّا مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٣٩﴾

40. Addoomada Eebe ee niyada san (xumaan ma arkaan).

إِلَّا عِبَادَ اللَّهِ الْمَخْلُصِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waxayna mudan kuwaasi risqi layaqaanno (Janno).

أُولَئِكَ لَهُمْ رِزْقٌ مَّعْلُومٌ ﴿٤١﴾

42. Faakihadna way heli, iyagoo lagu sharfi.

فَوَكِّهْهُمْ مِّمَّا كَرِهُوا ﴿٤٢﴾

43. Jannooyinka Naciima.

فِي جَنَّاتِ التَّعْبِيرِ ﴿٤٣﴾

44. Waxayna ku sugnaan sariiro iyagoo is qaabili.

عَلَى سُرُرٍ مُّتَقَابِلِينَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaana lala kor socon weel laga soo buuxiyay il (Janno).

بِطَافٍ عَلَيْهِمْ بِكَاسٍ مِنْ مَّعِينٍ ﴿٤٥﴾

46. Taasoo cad oo u macaan kuwa cabi.

بِإِصْبَاءٍ لَذَّةٍ لِلشَّرْبِ بَيْنَ يَدَيْهِمْ ﴿٤٦﴾

47. Mana laha caqli qaadid iyo waalli midna (Khamrada Jannada).

لَا فِيهَا عَاوِلٌ وَلَا هُمْ عَنْهَا يُنْفَرُونَ ﴿٤٧﴾

48. Agtoodana waxaa ahaan haween dhoowrsoon oo indha waaweyn.

وَعِنْدَهُمْ قَاصِرَاتُ الطَّرْفِ عِينٌ ﴿٤٨﴾

49. Ood moodo ukun la dhowray.

كَأَنَّهُنَّ بَيْضٌ مَكُونٌ ﴿٤٩﴾

Xumaanle waa laga abaal marin xumaantiisa, isagoon ladulmiyayn, addoomada Eebe ee suubanse waxay heli janno, nicmo, Sharaf iyo nolal wanaagsan, waxaana u adeegi wiilal darban, waxaana loo darbi wax wanaagsan ooy cabaan ooy kamidtahay khamri Janno oo xalaal ah oon madax xanuun iyo waalli midna lahayn, waxaana loo dhamayn wanaag.

Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Khamrada aduunka waxaa kusugan afar arimood: Waalli, Madax xanuun, Mantag iyo kaadi (badan). Tan aakhirase waa ka duwantahay sida aayada badan sheegeen iyo hadalka Nabigu. As-Saaffaat (38-49).

50. Wuxuuna qaabilay qaarkood qaar-

فَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ يَتَسَاءَلُونَ ﴿٥٠﴾

ka kale (ehelo Jannaha) iyagoo wax iswaydiin.

51. Wuxuuna dhihi mid hadlay oo ka mid ah waxaan kulahaa (adduunkii) saaxiib.

قَالَ قَائِلٌ مِنْهُمْ إِنِّي كَانَ لِي قَرِينٌ ﴿٥١﴾

52. Dhihi jiray adigu mawaxaad ka mid tahay kuwa rumeeyay (soobixinta).

يَعُولُ أَئِنَّكَ لَمِنَ الْمُصَدِّقِينَ ﴿٥٢﴾

53. Ma markaan dhimano oon carro noqono iyo lafo yaa nala abaalmarin.

أَوَدَأْمَسْنَا وَكَانَ تَرْكَاؤُنَا وَمَعظمًا إِنَّا لَمَدِينُونَ ﴿٥٣﴾

54. Wuxuuna dhihi mayla dayeeysaan.

قَالَ هَلْ أُنَبِّئُكَ بِمَا لَمْ يَحْكُمُوا بِكَ فَتَوَلَّوْا وَأَنْتُمْ كَاذِبُونَ ﴿٥٤﴾

55. Markaasu dayaa kuna arkaa jaxii-ma dhexdeeda.

فَأَطَاعُوا فِرْعَانَ فِي سَوَاءِ الْحَبِيرِ ﴿٥٥﴾

56. Wuxuuna dhahaa Eebaan kudhaartayee waxaad udhaweyd inaad ihalaagto (idhumiso).

قَالَ تَاللَّهِ إِن كُذِّبْتُمْ لَقَدْ أَهَلَّ بِكُمْ عَذَابُهُمْ كَذِبًا ﴿٥٦﴾

57. Haddayna Nicmada Eebe jirinna waxaan ahaan lahaa kuwa lagu soo kulmiyay (naarta).

وَلَوْلَا رِجْمَةُ رَبِّي لَكُنْتُمُ مِنَ الْمُحْضَرِينَ ﴿٥٧﴾

58. (Waxayna dhahaan ehelu jannuhu) miyeynaandhimaneynin*.

أَفَمَنْ حَقَّ عَلَيْهِمُ الْمَوْتُ إِذْ قَالَ لَهُمْ مَلَائِكُهُمْ مَاتُوا بِاللَّيْلِ وَاللَّيْلُ وَسَاءَ جُودُكُمْ إِذْ أَنْتُمْ كَاذِبُونَ ﴿٥٨﴾

59. Geerideenii hore mooyee laynama cadaabayn**.

إِنَّمَا تَدْعُوا مَنْ حَقَّ عَلَيْهِمُ الْمَوْتُ إِذْ أَنْتُمْ كَاذِبُونَ ﴿٥٩﴾

60. Taasina waa uun liibaanta wayn.

إِنَّ هَذَا الْقَوْمَ الْقَوْمُ الْعَظِيمُ ﴿٦٠﴾

61. Ee taasoo kale ha faleen kuwa camal falii.

يَعْمَلُونَ لِمَا يُهْمُونَ فَاحْبَسِي لَهُمْ أَصْحَابَ الْجَنَّةِ الْكَبِيرِ ﴿٦١﴾

Waxaa horey loo soo sheegay inay ehelu naarku (Eebe hanaga dheereeyee) is qaabili iyagoo calaacali oo is canaanan madax iyo raaciyaadba, iyagoo isu dhihi adaa ii lahaa iyo adaa idhumiya. Halkanna waxaa lagusheegay Ehelu jannaha iyo inay isqaabili iyagoo ka sheekaysan saaxiibadoodii adduunka ee xumaa iyo sida Eebe uga koriyay uguna nicmeeyay, taasoo ayan ka dhimanayn.

Xasan Albisri wuxuu yidhi: waxay ogaadeen (ehelu jannuhu) in nicmo kasta geeri goyso, markaasay dheheen: (Miyaynaan dhimanayn). As-Saaffaat (50-61).

* Ma nihin kuwo dhiman miyaa!?

** geeridii hore mooyee, mana layna cadaabayo! (dib u eegaha).

62. Mataasaa marti qaad u fiican (Jannada) mise geedii zaquum (xumeyd).

أَذْكَاءَ حَبْرُونَزُلْزَلًا أَمْ شَجَرَةَ الزَّقُّومِ ﴿٦٢﴾

63. Annagaa uga yeelay fitno (imtixaan) daalimiinta.

إِنَّا جَعَلْنَاهَا فِتْنَةً لِلظَّالِمِينَ ﴿٢٣﴾

64. Waana geed kasoobaxda gunta jaxiimo.

إِنَّهَا شَجَرَةٌ تَخْرُجُ فِي أَصْلِ الْجَحِيمِ ﴿٢٤﴾

65. Midhaheeduna waxaad moodaa madaxyo shaydaan.

طَلَعَهَا كَأَنَّهَا رُءُوسُ الشَّيَاطِينِ ﴿٢٥﴾

66. Iyaguna (ehelu naarku) waxbay ka cunaan, waxayne ka buuxiyaan caloosha.

فَإِنَّهُمْ لَا يَكُونُونَ مِنْهَا عَمَلًا يَأْتُونَ مِنْهَا الْبَطُونَ ﴿٢٦﴾

67. Waxayna kalooy mudan dheehid biyo kulayl daran.

ثُمَّ إِنَّ لَهُمْ عَلَيْهَا لَشَوَابًا مِّنْ حَمِيمٍ ﴿٢٧﴾

68. Markaas waxay ku noqon jaxiimo.

ثُمَّ إِنَّ مَرْجِعَهُمْ لَإِلَى الْجَحِيمِ ﴿٢٨﴾

69. Waxay heleen aabayaalkood oo baadi ah.

إِنَّهُمْ الْقَوَاءُ آبَاءُهُمْ ضَالِّينَ ﴿٢٩﴾

70. Iyaguna raadhoodii bay ku dag dagi.

فَهُمْ عَلَىٰ آثَارِهِمْ مُرْتَدُونَ ﴿٣٠﴾

71. Waxaa dhab ahaan u dhumay hortood badi kuwii hare.

وَأَقْدَصَلَ قَبَاهُمْ أَكْثَرُ الْأَوَّلِينَ ﴿٣١﴾

72. Waxaana udiray dhexdooda udi-gayaal.

وَأَقْدَرْنَا رَسَلَتْنَا فِيهِمْ مُنذِرِينَ ﴿٣٢﴾

73. Ee eeg siday noqotay cidhibtii kuwii loo digay.

فَأَنْظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الْمُنذِرِينَ ﴿٣٣﴾

74. Hasa yeesh ee addoomadii Eebe ee niyada samaa (cadaab ma arkaan).

إِلَّا عِبَادَ اللَّهِ الْمُخْلَصِينَ ﴿٣٤﴾

Eebe (weynaaye) markuu soo sheey ehelujannaha iyo wuxuu ku abaalmariyay wuu raaciyay Geed xun oo lagu margado laguna quudiyo ehelu naarka, taasoo lagu fidmeeyay intay aduunka joogeen. Sida gaalkii Abujahal oo yidhi markuu maqlay geedaas: mawaxaan Timir iyo Burcad aan cunno ahaynbaa mase aha siduu sheegayee waa geed daran oo madax shaydaanleh kana soo baxda Jaxiima salkeeda, ehelu naarkana isku cuno iyada iyo biyo kulayl badan hooygooduna waa Jaxiimo, maxaa yeelay Aabayaalkood oo dhunsan yey heleen kuna raaceen xumaanta, iyaga kahorna waxaa dhumay kuwii horeeyey badidood inkastoo loo diray udige waana laciqaabay.

Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi: haddii in yar oo geed kaas ah lagu dheeho Badaha adduunyada waxay ka fasaadin lahayd dadka dhulka jooga nolashooda, ee waa sidee ruuxay cunna utahay. Waxaa sheegay Tarmidi. As-Saaffaat (62-74).

75. Waxaa dhab ahaan noogudhawaa-qay (beryeey) Nabi nuux, Cid wax ajiibana (maqlana) annagaa u fiican.

وَأَقْدَرْنَا دَانَاؤُحَ فَلْيَعْمُرِ الْمُجِيبُونَ ﴿٣٥﴾

76. Waxaana Ka korinay isaga iyo ehelkiisiiba shidadii waynayd (maanshayntii).

وَجَنَّتَهُ وَأَهْلَهُ مِنْ الْكَرْبِ الْعَظِيمِ ﴿٧٦﴾

77. Waxaana ka yeelay faraciisii kuwa soo hadhay uun.

وَجَعَلْنَا ذُرِّيَّتَهُ هُمْ الْبَاقِينَ ﴿٧٧﴾

78. Waxaana ugu reebnay kuwo dambeeya (amaan ah).

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ فِي الْآخِرِينَ ﴿٧٨﴾

79. NabadGalyo Nuux korkiisa adduunyada ha udhex ahaato.

سَلَّمَ عَلَى نُوحٍ فِي الْعَالَمِينَ ﴿٧٩﴾

80. Saasaana ku abaal marinaa samafalayaalka.

إِنَّا كَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ ﴿٨٠﴾

81. Wuxuuna ka midyahay addoomaannada rumeeyay (xaqa).

إِنَّهُ مِنْ عِبَادِنَا الْمُؤْمِنِينَ ﴿٨١﴾

82. Markaasaan maanshaynay kuwii kale.

ثُمَّ أَعْرَفْنَا الْآخِرِينَ ﴿٨٢﴾

83. Waxaa kamid ah gargaarayaashiisa (Jidkiisaqaaday) Nabi Ibraahin.

* وَأَنْزَلْنَا مِنْ شِيعَتِهِ لِبَرْهَيْمَ ﴿٨٣﴾

84. Markuu ula yimid Eebihis qalbi fayow (xaq rumeeyey).

إِذْ جَاءَ رَبَّهُ بِقَلْبٍ سَلِيمٍ ﴿٨٤﴾

85. Markuuu ku yidhi Aabihiis iyo qoomkiisii maxaad caabudaysaan.

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِ مَاذَا تَعْبُدُونَ ﴿٨٥﴾

86. Ma been abuurasho yaad ilaahyo Eebe ka soo hadhay u dooranaysaan.

أَفِيكُمُ الْإِلَهَ دُونَ اللَّهِ تَرِيدُونَ ﴿٨٦﴾

87. Maxaadse ka maleysaneysaan Eebaha Caalamka.

فَمَا تَطَّكُرُكُمْ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٨٧﴾

Qisada nabi nuux iyo qoomkiisii iyo sida Eebe u koriyay isaga iyo intii raacday, una halaagay gaaladii beenisay wax badan bey quraanka ku soo aroortay, sidoo kale Nabi Ibraahimkii wadadii xaqa ahayd Ku raacayna isna waxbadan yaa quraanku ka waramay, iyo sida Eebe qalbigiisa u wanaajiyay xaqana u raaciyey, iyo wixii dhex maray isaga iyo Aabihiis iyo qoomkiisii oo dhib iyo xaq usheeg ah, maxaase Eebe laga malaysan haddii xumaan lagu madax adkaado iyo gaalimo, Xasan Albasari wuxuu yidhi: Qalbiga fayow waa kan ka nabadgalay gaalimo. As-Saaffaat (75-87).

88. Markasuu eegay Nabi Ibraahim xiddigaha.

فَنظَرَ نَظْرَةً فِي النُّجُومِ ﴿٨٨﴾

89. Wuxuuna yidhi waan bukaa.

فَقَالَ إِنِّي سَقِيمٌ ﴿٨٩﴾

90. Markaasay katageen kana jeedsa-deen.

فَوَلَّوْا عَنْهُ مُدْبِرِينَ ﴿٩٠﴾

91. Markassuu aaday Ilaahyaalkoodii (sanamyadii) wuxuuna ku yidhi miyeydaan (wax) cunayn.

فَرَاغَ إِلَىٰ آلِهِ الْعَبْرِيُّ فَقَالَ آلَا تَأْتُونَ ﴿٩١﴾

92. Maxaad leedihiin oydaan la hadlaynin.

مَا لَكُمْ لَا تَطْفُونَ ﴿٩٢﴾

93. Markaasuu ku foorariyay midigta oo ku garaacay.

فَرَاغَ عَلَيْهِمْ ضَرْبًا بِالْيَمِينِ ﴿٩٣﴾

94. Wayna soo qaabileen gaaladii xaggiisa iyagoo dag dagi. (markuu jajabiyay).

فَأَقْبَلُوا إِلَيْهِ يَرْفُونَ ﴿٩٤﴾

95. Wuxuuna ku yidhi ma waxaad caabudaysaan waxaad qoraysaan (sameyseen).

قَالَ الْعَبْدُونَ مَا تَنْتَجِبُونَ ﴿٩٥﴾

96. Eebaana idin abuuray idinka iyo waxaad camalfalaysaan.

وَاللَّهُ خَلَقَكُمْ وَمَا تَعْمَلُونَ ﴿٩٦﴾

97. Waxayna dhaheen u dhisa meel (dab lagushido) kuna tuura Jaxiimo (dabka).

قَالُوا أَبْنَاءُ اللَّهِ يُدْعَىٰ فَآءُ الْقَوْمِ فِي الْحَجِيرِ ﴿٩٧﴾

98. Waxay la dooneen dhagar iyagaana ka yeellay kuwo hooseeya (laga adkaaday).

فَأَرَادُوا بِهِ كَيْدًا فَجَعَلْنَاهُمُ الْأَسْقَلِينَ ﴿٩٨﴾

Aayadahan waxay ka warami Nabi Ibraahim iyo qoomkiisii sida suurada kalaba loogaga hadlay hadana wuxuu usheegay inuu jirranayhay marey rabeen inay baxaan si uu u jajabiyiyo sanamyadooda, wuuna burburiyay intuu la hadlay kuna yidhi wax macuneysaan, gaaladii markay arkeen way cadhoodeen meel dab lagushido yeyna usameeyeen Nabi Ibraahim, wayna ku tuureen, Eebaase ka badbaadiyay, dhagartoodiina ka yeelay baaba, dullina ku danbeysiiyay, Qataado wuxuu yidhi: Xiddiguu dayey, waa cirkuu dayey isagoo fikiri. As-Saaffaat (88-98).

99. Wuxuu yidhi anigu waxaan aadi Eebahay (hijro) wuuna i toosin.

وَقَالَ إِنِّي ذَاهِبٌ إِلَىٰ رَبِّي سَبَّحِينَ ﴿٩٩﴾

100. Eebow wax iga sii kuwa suuban (ilmo).

رَبِّ هَبْ لِي مِن الصَّالِحِينَ ﴿١٠٠﴾

101. Waxaana ugu bishaaraynay wiil dabeeco san.

فَبَشَّرْنَاهُ بِغُلَامٍ حَلِيمٍ ﴿١٠١﴾

102. Markuu ku gaadhay agtiisa socod wuxuu ku yidhi Nabi Ibraahim wiilkayow waxaan ku arkay hurdada anoo

فَلَمَّا بَلَغَ مَعَهُ السَّعْيَ قَالَ يَبْنَؤُ إِلَىٰ رَبِّي فِي الْمَتَامِ
إِنِّي أَرَىٰ أَحَدَكُمْ فَأَنْظُرُ مَاذَا تَرَوْنَ قَالَ يَتَأْتِبُ أَفْعَلُ

ku gawrici ee eeg waxaad fali, wuxuuna yidhi aabow samee waxa lagu faray waxaad heli hadduu Eebe doono inaan kamidnoqdo kuwa samree.

مَا تَوْصَّرُ سَجْدِي إِنْ شَاءَ اللَّهُ مِنَ
الصَّالِحِينَ ﴿١٣٦﴾

103. Markay hogaansameen oos u lagday wajiga.

فَلَمَّا أَسْلَمْنَا وَكُنَّا لِلْجِبِينِ ﴿١٣٧﴾

104. Yaan udhawaaqay Ibraahimow.

وَدَدَيْتُهُ أَنْ يَدَّ بَرَاهِيمُ ﴿١٣٨﴾

105. Dhab ahaan baad ugu rumeysay riyadii, sasaana ku abaalmarinaa samafalayaasha.

قَدْ صَدَّقْتَ الرُّؤْيَا إِنَّا كَذَلِكَ نَجْرِي
الْمُحْسِنِينَ ﴿١٣٩﴾

106. Taasina waa imtixaan muuqda (oo weyn).

إِنَّ هَذَا هُمُ الْبَالِغُونَ الْمُدِينِ ﴿١٤٠﴾

107. Waxaana ku furanay loog weyn (wan).

وَقَدَيْتُهُ بِذِيحِ عَظِيمِ ﴿١٤١﴾

108. Waxaana ugaga tagnay (ugureebnay) kuwa dambe.

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ فِي الْآخِرِينَ ﴿١٤٢﴾

109. Nabadgalyo (salaan) Nabi Ibraahim korkiisa ha ahaato.

سَلَّمَ عَلَىٰ إِبْرَاهِيمَ ﴿١٤٣﴾

110. Saasaana ku abaal marinaa samofalayaasha.

كَذَلِكَ نَجْرِي الْمُحْسِنِينَ ﴿١٤٤﴾

111. Wuxuu ka mid ahaa addomadanaada mu'miniinta ah.

إِنَّهُ مِنْ عِبَادِنَا الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٤٥﴾

112. Waxaan ugu bishaaraynay Isxaaq oo Nabi suuban ah.

وَيَسَّرْنَا لَهُ بِإِسْحَاقَ نَبِيًّا مِنَ الصَّالِحِينَ ﴿١٤٦﴾

113. Waana barakaynay Ibraahim iyo Isxaaqba, waxaana ka mid ah faracooda mid samafala iyo mid naftiisa si cad u dulmiya.

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ وَعَلَىٰ إِسْحَاقَ وَمِنْ ذُرِّيَّتِهِمَا مُحْسِنٌ
وَظَالِمٌ لِنَفْسِهِ مُبِينٌ ﴿١٤٧﴾

Nabi Ibraahin (Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) markii Eebe u gargaaray yuu hijrooday, Eebana wuxuu ka baryey inuusiyo ilmo fican, markaasaa Eebe siiyey Ismaaciil kuna imtixaanay inuu gawraco, hadana furtay markay udarbadeen fulinta amarkii Eebe, magacfiicana ugu reebey Eebe aduunka, hadana uu ugu bishaareeyay Isxaaq oo suuban.

Ibnu Cabaas waxaa laga wariyey: Kanlafurtay waa Nabi Ismaaciil, yuhuudina waxay sheegtay inuu isxaaqyahay, wayna beensheegeen. As-Saaffaat (99-113).

114. Dhab ahaan yaan ugu mannaysanay (ugunicmeeynay) Nabi Muuse iyo NabiHaaruun (Nabinimo). ﴿وَلَقَدْ مَنَّا عَلَىٰ مُوسَىٰ وَهَارُونَ﴾
115. Waana ka korinay iyaga iyo Qoomkooda dhibaataadii waynayd. ﴿وَجَعَلْنَاهُمَا قَوْمَهُمَا مِنَ الْكُتُبِ الْعَظِيمِ﴾
116. Waana u gargaaray, waxayna noqdeen kuwo adkaaday (sareeyey). ﴿وَنَصَرْنَاهُمْ فَكَانُوا هُمُ الْعَالِينَ﴾
117. waxaana siinay Kitaabkii caddaa. ﴿وَأَتَيْنَاهُمَا الْكِتَابَ الْمُسْتَبِينَ﴾
118. Waxaana ku hanuuninay Jidka toosan. ﴿وَهَدَيْنَاهُمَا الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِيمَ﴾
119. Waxaana ugu dhaafnay dadka dambe, (amaan ah). ﴿وَرَوَّعْنَا عَلَيْهِمَا فِي الْأَخْيَرِ﴾
120. Nabadgalyo ha ahaato Nabi Muuse iyo Nabi Haaruun korkooda. ﴿سَلَّمَ عَلَىٰ مُوسَىٰ وَهَارُونَ﴾
121. Saasaan ku abaalmarinaa kuwa wanaagga fala. ﴿إِنَّا كُنَّا ذَٰلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ﴾
122. Waxayna ka midyihiin addoomadanada mu'miniinta ah. ﴿إِنَّهُمَا مِنْ عِبَادِنَا الْمُؤْمِنِينَ﴾

Nabi Muuse iyo walaalkiis Nabi Haaruun meelo badanbay quraanka kaga soo arooreen, iyo waxay kala kulmeen Fircoon iyo Qoomkiisii iyo Bani israa'iil markii danbe iyo inuu eebe ka koriyay iyaga iyo qoomkoodii dhibaataadii waynayd oo ahayd maansheyntii Fircoon iyo colkiisii Eebena Kitaab cad siiyay, Jidka wanaagsanna ku toosiyay sharaf iyo magacfiicanna ureebay, waxayna kutusin arrinkaasu in Eebe la jiro oo gargaar iyo sharaf udambaysiin ciddii xaqa iyo runta kudadaasha. Dabari wuxuu yidhi: jidka toosani waa diinta islaamka waana diinta Eebe ee uu Nabiyada ku bixiyay. As-Saaffaat (114-122).

123. Ilyaasna Wuxuu ka mid ahaa Rasuullada. ﴿وَإِنَّ إِلْيَاسَ لَمِنَ الْمُرْسَلِينَ﴾
124. Markuu ku yidhi qoomkiisii miyeydaan dhawrsaneyn (Eebe kayaa-bayn). ﴿إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ أَالْتَقُونَ﴾
125. Mawaxaad baryeysaan Bacli (Sannam) ood ka tagaysaan Eebaha abuurka wanaajiya. ﴿أَتَدْعُونَ بَعْلًا وَتَذَرُونَ أَحْسَنَ الْخَالِقِينَ﴾
126. Ee ah Eebihiina iyo Eebaha aabayaalkiini hore. ﴿اللَّهُ رَبُّكُمْ رَبَّ آبَائِكُمْ الْأَوَّلِينَ﴾
127. Markaasay beeniyeen, waxaana ﴿فَكَذَّبُوهُ فَإِنَّهُمْ لَمُحْضَرُونَ﴾

loo soo kulmin (Cadaab).

128. Laakiin adoomada Eebe ee niyada san (waxay lakulmi khayr).

إِلَّا عِبَادَ اللَّهِ الْمُخْلِصِينَ ﴿١٢٨﴾

129. Waxaana ugu reebnay dadka danbe (amaan ah).

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ فِي الْآخِرِينَ ﴿١٢٩﴾

130. Nabadgalyo ha ahaato Ilyaas korkiisa.

سَلَّمْنَا عَلَىٰ آلِ يَاسِينَ ﴿١٣٠﴾

131. Saasaana ku abaalmarinaa kuwa sama fala.

إِنَّا كَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ ﴿١٣١﴾

132. Wuxuuna ka midyahay adoomadanada mu'miniinta ah.

إِنَّهُ مِنْ عِبَادِنَا الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٣٢﴾

Ilyaas wuxuu ka mid ahaa Nabiyada Eebe, wuxuuna Eebe u diray Bini israa'iil oo caabudii jiray sanam la dhihi jiray Bacli, wuxuuna ugu yeedhay Cibaadada Eebe, iyo inay katagaan cibaadada waxa ja soo hadhay si darana wuu u waaniyay, wuxuuna Eebe ku abaalmariey inuu ka yeelay addoomadiisa toosan ee wanaaga Fala, magac fiicana wuu ugu reebay dadka.

Taasina waxay ku tusin inuu xaqa iyo cidka ku socotaayi wanaagga iyo cidhibta fiican ku danbeyn. Inkastoo baadilku muddooyin laga yaabo inuu muuqdo oo darrado. As-Saaffaat (123-132).

133. Nabi luudhna wuxuu ka mid ahaa rasuulada (la diray).

وَإِنَّ لُوطًا لَمِنَ الْمُرْسَلِينَ ﴿١٣٣﴾

134. Xus markaan korinay isaga iyo ehelkiisaba dhamaan.

إِذْ نَجَّيْنَاهُ وَأَهْلَهُ وَأَجْمَعِينَ ﴿١٣٤﴾

135. marka laga reebo Cajuuso (haweeneydiisii) oo ku hadhay halaaga.

إِلَّا عَجُوزًا فِي الْغَيْرِينَ ﴿١٣٥﴾

136. Ka dibna waxaan halaagnay intii kale.

ثُمَّ دَرَرْنَا الْآخِرِينَ ﴿١٣٦﴾

137. Idinkuna (reer makaad) waxaad maraan dhulkoodii waabariga.

وَأَنْتُمْ لَتَمُرُونَ عَلَيْهِمْ مُّضْجِينَ ﴿١٣٧﴾

138. Iyo Habeenkaba ee miyeydaan wax kasaynin.

وَبِأَيْدِيهِمْ أَفْئِدَةٌ تَقُولُونَ ﴿١٣٨﴾

139. Nabi Yuunusna wuxuu ka mid ahaa Rasuulladii (ladiray).

وَإِنَّ يُونُسَ لَمِنَ الْمُرْسَلِينَ ﴿١٣٩﴾

140. Xus markuu kudhuuntay (kucararay) Doontii buuxday.

إِذْ أَوْقَىٰ إِلَىٰ الْفُلِّكَ الْمَشْحُوبِ ﴿١٤٠﴾

141. Oo uu qoriritay noqdayna mid laga reevey. (Baddana lagu tuuray).

فَمَسَاهَمُ فَكَانَ مِنَ الْمُدْحَضِينَ ﴿١٤١﴾

142. Kalluunna liqay isagoo ladagaalay. ﴿١٤٢﴾ فَالْقَمَّةُ الْخُرُوبُ وَهُوَ عَلَيْهِمُ
143. Hadduusan noqonin kuwa Eebe u tasbiixsada (xusa). ﴿١٤٣﴾ قَوْلًا أَنَّهُ كَانَ مِنَ الْمُسْتَجِيرِينَ
144. Wuxuu kunagaan lahaa calooshii-sa tan iyo maalinta lasoo bixin dadka. ﴿١٤٤﴾ لَيْتَ فِي بَطْنِهِ إِلَى يَوْمِ يُبْعَثُونَ
145. Waxaana kutuuray banaan cidla ah isagoo buka. ﴿١٤٥﴾ * فَتَبَدَّدَهُ بِالْعَرَاءِ وَهُوَ سَقِيمٌ
146. Waxaana ka soo bixinay korkiisa Geedka yaqdiinka ah (hadhayn dar-teed). ﴿١٤٦﴾ وَأَثْبَتْنَا عَلَيْهِ شَجَرَةً مِّنْ يَقْطِينٍ
147. Waxaana u diray Boqolkun oo dad ah ama ka badan. ﴿١٤٧﴾ وَأَرْسَلْنَاهُ إِلَى مِائَةِ آلَافٍ أَوْ يَزِيدُونَ
148. Wayna rumeeyeen, waxaana uraaxaynay (sugnay) tan iyo mudo. ﴿١٤٨﴾ فَاتَّخَذُوا مِنْهُمْ إِلَهًا حَبِيبًا

Nabi Luudh iyo Nabi Yuunus iyo Nabiyadii kaleba iyo Qoomamkoodii waxay kudambeeyeen iyo sida Eebe kukala maamulay Quraankaa tilmaamay, waxaase muhim ah in xumaanta laga dheeraado, wanaagana lagu dadaalo, tan kale waa in la ogaado in Eebe wax walba karo farajkiisuna dhawyahay ducadana aqbal.

Qisadiisuna waxay ahayd inuu dar Eebe uga tagay uguna cadhooday qoomkiisii markaas Eebe imtixaanay. Rasuulkuna wuxuu yidhi: Cidna uma haboona inay dhahdo anaa ka khayr bdan Yuunus Bini mataa. (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkooda ha yeelec). As-Saaffaat (133-148).

149. Waydii gaalada, in Eebahaa gabdho yeeshay iyaguna Wiilal. ﴿١٤٩﴾ فَأَسْتَفْتِيهِمُ الرِّبَّكَ الْأَبْنَاتُ وَلَهُنَّ الْبَنُونَ
150. Mise waxaan abuuray malaa'igta oo dhadig iyaguna ay Joogeen. ﴿١٥٠﴾ أَمْ خَلَقْنَا الْمَلَائِكَةَ إِنثًا وَهُمْ شَاهِدُونَ
151. Taasi waa been abuurashadoodii ay dhahayeen. ﴿١٥١﴾ أَلَا إِنَّهُمْ مِّنْ إِفْكِهِمْ لَيَقُولُونَ
152. Eeba waa dhalay waana beenaalayaal. ﴿١٥٢﴾ وَلَدَ اللَّهِ وَانَّهُمْ لَكَاذِبُونَ
153. Ma wuxuu ka doortay gabdho wilasha. ﴿١٥٣﴾ أَصْطَفَى الْبَنَاتِ عَلَى الْبَنِينَ
154. Maxaa idiinku wacan ood sidaas u xukumaysaan. ﴿١٥٤﴾ مَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ
155. Miyeeydaan wax xusuusaneyn. ﴿١٥٥﴾ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ
156. Mise waxaa idiin sugnaatay xujo cad. ﴿١٥٦﴾ أَمْ لَكُمْ سُلْطٰنٌ مُّبِينٌ

157. Keena Kitaabkiinna (cadayn) haadaad runlayaaltihiin.

فَأَنزَلْنَا بِكِتَابِكُمْ إِن كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿١٥٧﴾

158. Waxay yeeleen gaaladu Eebe iyo Jinniga dhexdooda (qaraabo) nasab, Jinniguna dhabahaanbuu u ogyahay in gaalada lakeeni (qiyaamada).

وَجَعَلُوا بَيْنَهُ وَبَيْنَ الْجَنَّةِ نَسَبًا وَلَقَدْ عَلِمَتِ الْجِنَّةُ إِنَّهُمْ لَمُحْضَرُونَ ﴿١٥٨﴾

159. Eebaa kanasahan (kadheer) waxay ku tilmaamayaan.

سَبَّحَنَ اللَّهُ عَمَّا يُصِفُونَ ﴿١٥٩﴾

160. Laakiin adoomada Eebe ee niyada suubiyey (Waa ka fogyihiin xumaan).

إِلَّا عِبَادَ اللَّهِ الْمُخْلَصِينَ ﴿١٦٠﴾

Gaaladu had iyo jeer af xunyihiin iyagoo doqonimana kudarsaday, halkanna waxay Eebe (sareeye) kusheegeen in malaa'igtu gabdho utahay, taasina waa beentoodii'ee Eebe ma yeelanin Ilmo wiil iyo gabadh midna, ileen umabaahnee, wax xuja ah ooy gaaladu haysana majiro, Eebana waa kadheeryahay xumaan. Mujaahid wuxuu sheegay in gaaladu dhaheen: Malaa'igtu waa gabdho Eebe sareeye, markaasuu abubakar yidhi yaa hooyo u ah markaasaydhaheen: Haweenjinni. (Eebaa ka dheer waxay ku sheegeen). As-Saaffaat (149. 160).

161. Idinka iyo waxaad caabudaysaan (gaalooy).

فَإِنَّكُمْ وَمَا تَعْبُدُونَ ﴿١٦١﴾

162. Qofna kama fidmaysaan (dhumiisaan) Eebe.

مَا أُنشِرْ عَلَيْهِ بَقِيَّتَيْنِ ﴿١٦٢﴾

163. Marka laga reebo kuwagali jaxii-mo.

إِلَّا مَنْ هُوَ صَالِ الْجَبِّيرِ ﴿١٦٣﴾

164. Ruuxkastoo nagamid ah (malaa'ig-ta) wuxuuleeyahay meel lagu yaqaan.

وَمَا مِمَّا إِلَّا لَهُ مَقَامٌ مَّعْلُومٌ ﴿١٦٤﴾

165. Waana safannahay (cibaado dar-teed).

وَأَنَّا لَنَحْنُ الصَّافُونَ ﴿١٦٥﴾

166. Waana tasbiixsanaa (qadarin Eebe).

وَأَنَّا لَنَحْنُ الْمُسَبِّحُونَ ﴿١٦٦﴾

167. Waxayna ahaayeen gaaladu kuwii dhaha.

وَإِنْ كَانُوا لَيَقُولُونَ ﴿١٦٧﴾

168. Hadduu yahay agtanada xuskii (warkii) kuwii hore (Kitaab).

لَوْ أَنَّ عِنْدَنَا ذِكْرًا مِنْ الْأَوَّلِينَ ﴿١٦٨﴾

169. Waxaan noqonlahayn addoomaha Eebe ee suuban.

لَكُنَّا عِبَادَ اللَّهِ الْمُخْلَصِينَ ﴿١٦٩﴾

170. Wayse ka gaaloobeen Kitaabkii (quraanka) wayna ogaandoonaan (waxa ku dhaca).

فَكَفَرُوا بِآيَاتِهِ فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ﴿١٧٠﴾

Gaalo iyo waxay caabudi oo baadil ah midna makaro inay waxdhumiyaan marka lagareebo kuwa wanaaga kalexda ee xumaanta faraha lagala, ehelu naarna noqda Malaa'igta Eebana xumaan waa kafogtahay, midwalbana shaqo iyo meel lagu ogyahay yuuleeyahay, waxayna usaganyihiin cibaadada Eebe iyo wayneyntiisa.

gaaladii qureesheedna waxay ahaayeen intaan quraanku soodagin kuwa jeclaa inay helaan Kitaab uga warama umadihii hore, wayse kagaaloobeen markuu uyimid, wayna ogaandoonaan cidhibteeda, waxaana lamid noqon iyaga cidkastoon Quraanka iyo xaqa uu sheegi raacin rumaynina. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelec) wuxuu yidhii: Waxaa laynagaga fadilay dadka Saddex: Malaa'igta sideeda oon usafano (Salaada) dhulkoo masjid inoo ah, iyo Carrada oo daahir inoo ah. Waxaa sheegay Muslim. As-Saaffaat (161-170).

171. Dhah ahaanbuu ugu hormaray yaboohannagii adoomahannagii aan diray (Rasuuladii).

وَلَقَدْ سَبَقَتْ كِمْثَالُ الْعِبَادِ نَا الْمُرْسَلِينَ ﴿١٧١﴾

172. In iyaga uun loo gargaari.

إِنَّهُمْ لَهُمُ الْمَنْصُورُونَ ﴿١٧٢﴾

173. Iyo in junuudanada (xaqa raacay) ay adkaan (Guuleysan).

وَإِنْ جُنَدَنَا لَهُمُ الْغَالِبُونَ ﴿١٧٣﴾

174. Ee kajeedso xagooda tan iyo muddo.

فَقَوْلٌ عَنْهُمْ تَحَّىٰ حِينَ ﴿١٧٤﴾

175. Fiirina iyaguna wayfiirin doonaane (waxa kudhaca).

وَأَبْصَرُهُمْ فَسَوْفَ يُبْصِرُونَ ﴿١٧٥﴾

176. Macadaabkanagay (Gaaladu) da-dajisan.

أَقْعِدْنَا إِنَّا بِنَاتِعِمْ جُلُودًا ﴿١٧٦﴾

177. Markuu ku dago caddabku ardaagooda waxaa xumaan subaxa kuwa loodigay.

فَإِذَا نَزَلَ بِسَاحَتِهِمْ فَسَاءَ صَبَاحُ الْمُنْذَرِينَ ﴿١٧٧﴾

178. Ee kajeedso xagooda tan iyo muddo.

وَقَوْلٌ عَنْهُمْ تَحَّىٰ حِينَ ﴿١٧٨﴾

179. Fiirina iyaguna wayfiirin doonaane (waxa kudhaca).

وَأَبْصَرَهُمْ فَسَوْفَ يُبْصِرُونَ ﴿١٧٩﴾

180. Waxaana kanasahan Eebahaaga sharafta leh waxay kutilmaamaan gaaladu (oo xun).

سُبْحٰنَ رَبِّكَ رَبِّ الْعِزَّةِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿١٨٠﴾

181. Nabadgalyana ha ahaato Rasuuladii korkooda.

وَسَأَلْنَا عَلَى الْمُرْسَلِينَ ﴿١٨١﴾

182. Mahadna waxaa iskaleh Eebaha
(Barbaariyaha) Caalamka ah.

وَالْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿١٨٢﴾

Eebe wuxuu ballan kuqaaday inuu ugargaaro adoomadiisa suuban markaay si fiican uraacaan sharcigiisa iyo wadadiisa toosan, fuliyaana amarkiisa siduu Nabiyadii iyo intii raacdayba ugu gargaaray. Tankale ciqaabta Eebe wax ladadajisto ma aha ee hasugeen xaqdiidayaashu waxay kalakulmaan xumaanta iyo dulmiga. Eebana waa kadheeryahay ceeb, wuxuuna mutaa mahad iyo wayneyn. Anas waxaa laga wariyey in Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) yidhi maalintii khaybar: Hadaan dagno ardaa qoom waxaa xumaada subaxa kuwa loo digay. Waxaa sheegay Bukhaari iyo Muslim. As-Saafaat (171-182).



Suurat Saad

سورة ص

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Xarafka hore wuxuu kutusin mucjisada (Quraanka), Quraanka sharafta leh yaan kudhaaranay (waalaydin soo bixin).

ص وَالْقُرْآنِ ذِي الذِّكْرِ ❶

2. Kuwii gaaloobayna waxay kusuganyihiin isla wayni iyo khilaaf (xaqdii-do).

بِلِ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي عِزِّهِمْ وَشِقَاقِي ❷

3. Imisaan halaagnay hortood qarni ay markaas dhawaaqeen waqti aan dhawaaq waxba tareynin.

كِرَاهِلْكَأَمِنْ قَبْلِهِمْ مِنْ قَرْنٍ فَنَادَ وَأَوْلَاتٍ
حِينَ مَنَاصٍ ❸

4. Waxayna layaabeen gaaladii inuu uyimaado dige ka mid ah waxayna dhaheen gaaladii kani waa sixirroow beenaale ah.

وَعَجِبُوا أَنْ جَاءَهُمْ مُنذِرٌ مِنْهُمْ وَقَالَ الْكَاهِرُونَ هَذَا
سِحْرٌ كَذَّابٌ ❹

5. Ma wuxuu ka dhigay ilaahyadii ilaah kaliya, arrintaasi waa wax lala yaabo.

أَجْعَلِ اللَّهُ لِلْأَلْهَةِ إِلَهًا وَاحِدًا إِنَّ هَذَا لَشَيْءٌ مُجْتَبٍ ❺

6. Wuu kala tagay shirkii (madaxdii) kamidka ahayd, waxayna isu dhaheen war socda oo ku samra (kusugnaada) Ilaahyaalkiina, arrintani waa wax laynala dooni.

وَأَنطَلِقُ الْمَلَأُ مِنْهُمْ أَنْ آمَسُوا وَأَصْبَرُوا عَلَىٰ إِلَهٍ كَمَا كُنَّا
إِنَّ هَذَا لَشَيْءٌ يُرَادُ ❻

7. Manaana kumaqlin tanoo kale diintii kale (Nasraaniyada) arintan Eebe kaliya waa wax la been abuurtay.

مَا سَمِعْنَا بِهَذَا فِي الْعِلْمِ الْأَخِيرِ إِنَّ هَذَا
إِلَّا خَيْالٌ ❼

8. Ma quraankaa lagudajiyey isagoo na dhexjooga (anagaa ka mudan) waxayse kaga sugan yihiin Quraankayga shaki walina mayan dhadhamin Cadaabkayga.

أَنزَلَ عَلَيْهِ الذِّكْرُ مِنْ بَيْنِنَا بَلْ هُوَ فِي شَكٍّ مِنْ ذِكْرِي بَلْ
لَمَّا يَدْعُوا عَذَابٌ ❽

Eebe wuxuu ku dhaartay inay gaalada makaad kusugnaayeen khilaaf iyo kibir, iyadoo jirto inuu kuwo badan oo hortood gaaloobay Eebe halaagay, calaacalna wax mataro marka ruuxa xaqa diido oo ku tilmaamo cidda u yeedhi sixir iyo been iyo xumaan, mase wax lala yaabaa inuu Alle kaliyahay, maxayse tari xumaan lagu madax adeygo iyo waxyaalo kale oo lacaabudo iyo isla weynaan oon qiimo lahayn. saad (1-8).

9. Ma agtaada khasnadaha naxariista Eebehaaga adkaada ee bixinta badan (khayrka) yahay.

أَمْ عِنْدَهُمْ خَزَائِنُ رَحْمَةِ رَبِّكَ الْعَزِيزِ الْوَهَّابِ ﴿٩﴾

10. Mise waxaa u sugnaaday xukunka Samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya, ha u koreen sallaanno xagga (samada).

أَمْ لَهُمْ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا فَلْيَرْتَقُوا فِي الْأَسْبَابِ ﴿١٠﴾

11. Junuuda (Colka) halkaas joogaana (Gaalada) waa xisbiyo la jabin (laga adkaan).

جُنُودًا مَّا هُنَّ آتِكَ مَهْرُومًا مِنَ الْأَخْرَابِ ﴿١١﴾

12. Waxaa beeniyey xaqaan iyaga ka hor qoomkii (Nabi) Nuux iyo (reer) caad iyo Fircoonkii tiirarka lahaa.

كَذَّبَتْ قَبِيلَهُمْ قَوْمٌ لُّوجٌ وَعَادٌ وَفِرْعَوْنٌ ذُو الْأَوْتَادِ ﴿١٢﴾

13. Iyo Reer Thamuud iyo qoomkii (Nabi) Luud iyo Asaxaabtii kaynta (Qoomkii) Nabi Shucayb, kuwaas waa xisbiyadii (Xaqa beeniyey).

وَتَمُودُ وَقَوْمٌ لُّوطٍ وَأَصْحَابُ لَيْكَةِ أُولَئِكَ الْأَخْرَابِ ﴿١٣﴾

14. Midaan Rasuullada beenin majiro, markaasay ciqaabtaydii ku dhacday.

إِنْ كُلُّ الْأَكْذَابِ الرُّسُلِ فَحَقَّ عِقَابِ ﴿١٤﴾

15. Kuwaasuna (Gaaladii Makaad) ma sugayaan waxaan hal qaylo ahayn, mana laha celin iyo sugid midna.

وَمَا يَنْظُرُهُمْ إِلَّا الْأَصْحَابُ وَجِدَّةٌ مَّا لَهُمَنْ فَوَاقِ ﴿١٥﴾

16. Waxayna dhaheen Gaaladii Eebow noo dadaji qaybtanada (Ciqaabtanada) Maalinta xisaabta ka hor, (Qiyaamada).

وَقَالُوا رَبَّنَا عَجِّلْ لَنَا قِطْنَآ قَبْلَ رَوْحِ الْحِسَابِ ﴿١٦﴾

Khayr iyo wanaag Eebe agtiisa yey yaalaan, cid wax ka og ama ku tasarufi karta Naxariista Eebe oon isaga ahayn ma jirto, xukunka Cirka iyo dhulka iyo waxa khalqi ah ee u dhaxeeyana Eebaa iska leh, si kastoo Gaalo isugu daydo inay ogaato waxa Eebe u qarsoonna uma suurowdo, ee jabaa udanbeyn sidii Gaaladii horeba loo halaagay, ciqaab soo dadajinna wax Eebe lawarsado ma aha maxaayeley dhab ahaanbuu ruux walba ula kulmi wuxuu camalfalay, Ibnu Jariir wuxuu yidhi: Waxay warsadeen in Aduunka loogu soo dadajiyo waxay mutaan Khayr iyo sharba. saad (9-16).

17. Ku samir (u adkayso) waxay sheegi xusuusana addoonkaygii Daa'uud ahaa ee xoogga lahaa, wuxuuna ahaa noqosho (Toobad keen) badane.

أَصْبِرْ عَلَى مَا يَقُولُونَ وَأَذْكُرْ عَبْدًا نَادَاوُدَ ذَا الْأَيْدِ إِنَّهُ
أَوَّابٌ ﴿٧٧﴾

18. Annagaa u sakhirray (u fududaynay) Buuraha, wayna la tasbiixsadaan Galab iyo Subaxba.

إِنَّا سَخَّرْنَا الْجِبَالَ مَعَهُ يُسَبِّحْنَ بِالْعُشِيِّ
وَالْأُشْرُقِ ﴿٧٨﴾

19. Shimbirahana waa loo kulmiyey, dhamaantoodna waxay u noqdaan (Adeecaan) Eebe.

وَالطَّيْرَ مَحْشُورَةً كُلٌّ لَهُ أَوَّابٌ ﴿٧٩﴾

20. Waana adkaynay xukunkiisa (Daa'uud) waxaana siiney xigmad (Nabinimo) iyo fahmo iyo hadal caddayn (iyo garsoorid).

وَشَدَدْنَا مُلْكَهُ وَوَعَيْنَهُ الْحِكْمَةَ وَفَصَّلَ
الْخِطَابِ ﴿٨٠﴾

21. Ma ku soo gaadhay warkii kuwii doodayey, markey Mixraabka ugu soo dheceen.

* وَهَلْ أَمَّاكَ نَبُؤُا الخَصْمِ إِذْ تَسَوَّرُوا
الْمِعْرَابِ ﴿٨١﴾

22. una soo galeen Daa'uud oo markaas uu ka argagaxay, ayna ku dhaheen ha cabsan, waxaan nahay doodayaal qaar-kanno qaarkakale dulmiyey, ee si xaq ah noo kala xukun, hana joowrfalin, naguna hanuuni jidka toosan (xaqa).

إِذْ دَخَلُوا عَلَى دَاوُدَ فَفَرَّجَ مِنْهُم مَّا ظَنُّوا أَنَّهُمْ
خَصَّمَانِ بَعْضٌ لِّبَعْضٍ فَاتَّخَمُوا بِمِنَابِقِ الْهَيْ
وَلَا تُنظِطْ وَأَهْدِنَا إِلَى سَوَاءِ الصِّرَاطِ ﴿٨٢﴾

Eebe wuxuu faray Nabigu inuu ku samro una adkeysto dhibka Gaalada iyo xaqdiidnimadooda, markaasuu hadana xusuusiyey qisadii Nabi Daa'uud iyo siduu ugu dadaalijiray toobadda iyo cibaadada Eebe, looguna sakhirey Buuraha iyo shimbiraha ayna Eebe la xusi jireen, xukun adag iyo Xigmo iyo dood kala gayna Eebe siiyey, laguna imtixaamay Caddaaladda iyo Garsooridda, xadiith saxiis ahna waxaa ku sugnaa inuu Nabigu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Salaad wuxuu Eebe ujeclaa Salaadii Daa'uud, Soonna wuxuu Eebe ujeclaa Soonnii Daa'uud wuxuuna seexan jiray habeen badhka, wuxuu kici jiray seddex meelood meel hadana wuxuu seexan jiray sudus, wuxuuna soomi jiray Maalin, maalinna wuu afuri jiray mana carari jirin. şaad (17-22).

23. (Waxayna dheheen) kani waa wa-laalkay wuxuuna leeyahay sagaal iyo sagaashan Ido ah, anna waxaan leeyahay mid kaliya, wuxuuna sheegtay inaan siiyo hadalkiina wuu igaga adkaaday.

إِنَّ هَذَا أَخِي لَهُ تِسْعٌ وَتِسْعُونَ نَجِيَةً وَلِيَ نَجِيَةً وَوَجِدَةٌ
فَقَالَ أَكْفُلْنِيهَا وَعَزَّنِي فِي الْخِطَابِ ﴿٨٣﴾

24. Wuxuuna yidhi «Daa'uud» wuu kugu dulmiyey warsashada Laxdaada

قَالَ لَقَدْ ظَلَمَكَ بِسُؤَالِ نَجِيَّتِكَ إِلَى نَجَاتِهِ وَإِنَّ كَبِيرًا

(inuu ku biiriyo) Idihiisa, in badan oo ka mid ah kuwa wax isku darsadana qaarkood waxay ku xadgudbaan (dulmiyaan) qaarka kale, marka laga reebo kuwa xaqa rumeeyey ee camalka wanaagsan falay, wayna yaryihiin kuwaasi, Daa'uudna wuxuu umaleeyey inaan ibtileynay wuxuuna ka dambidhaaf dalbay Eebihis, rukuuc (sujuudbuuna) la dhacay wuuna noqday.

25. Markaasaan u dambi dhaafnay, agtanada wuxuu ku leeyahay dhaawaansho iyo noqosho fiican (darajo sare).

مِنَ الظَّالِمِينَ بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَقَلِيلٌ مَا هُمْ وَظَنَّ دَاوُدُ أَنَّمَا فَتَنَّاهُ فَاسْتَغْفَرَ رَبَّهُ وَحَرَّزْنَاهُ أَتَابًا ﴿٤٥﴾

فَفَعَّرْنَا لَهُ ذَلِكُمْ وَإِنَّا لَهُ عِنْدَنَا لَرُفِيقٌ وَحُسْنِ مَقَابٍ ﴿٤٥﴾

Qisadan ah inuu Eebe imtixaamey Nabi Daa'uud iyo doodayaasha u yimid waxaa fiican in loo rumeeyo sida quraanku u sheegay lagana dheeraado waxyaalo kale oo taaban sharafta nabiga Quraankana aan waafaqsaneyn, waxa muuqda waa inay doodayaal ugu yimaadeen Daa'uud si kada ah, kana codsadeen inuu cadaalad ku xukumo, wixii ka dhacayna Eebe ka saamaxay xaga xukunka doodayaasha, waxaana cid walba looga baahanyahay toobadkeed iyo Eebe ku xidhnaan haday Nabiyaduba saas yihiin. saad (23-25).

26. (Eebe wuxuu yidhi): Daa'uudow annagaa kaa yealley khaliifka dhulka ee dadka kukala xukun xaqa hana raacin hawada (xun) oo kolkaas uu kaa dhumiyo jidka Eebe kuwa ka dhuma jidka Eebe waxaa u sugnaaday cadaabdarahan halmaankoodii Maalinta xisaabta (Qiyaamada) darteed.

يٰۤاٰدُوۤدُ اِنَّا جَعَلْنَاكَ خَلِيفَةً فِى الْاَرْضِ فَاحْكُم بَيْنَ النَّاسِ بِالْحَقِّ وَلَا تَتَّبِعِ الْاَهْوٰى فَيُضِلَّكَ عَنْ سَبِيْلِ اِلٰهِ اِنَّ الَّذِيۡنَ يَضِلُّوۡنَ عَنْ سَبِيْلِ اِلٰهِ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيۡدٌۢ بِمَا نَسُوۤا يَوْمَ الْحِسَابِ ﴿٤٦﴾

27. Maanaan u abuurin Samada iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya dana laan (Ciyaar). taasina waa siday maleeyeen kuwii Gaaloobay halaaguna wuxuu ugu sugnaaday kuwii Gaaloobey Naar.

وَمَا خَلَقْنَا السَّمٰۤاءَ وَالْاَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا بِطِلَافٍ ذٰلِكَ ظَنُّ الَّذِيۡنَ كَفَرُوۡا وَاُوۡلِىِّ الَّذِيۡنَ كَفَرُوۡا مِنَ النَّارِ ﴿٤٧﴾

28. Miyaan ka yeeleynaa kuwii xaqa rumeeyey oo camal fiican falay sida kuwa hallayn dhulka, mise waxaan kala mid dhigaynaa kuwa dhowrsada kuwa xun oo kale (Gaalada).

اَمْ جَعَلَ الَّذِيۡنَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحٰتِ كَالْمُفْسِدِيۡنَ فِى الْاَرْضِ اَمْ جَعَلَ الْمُتَّقِيۡنَ كَالْفُجَّارِ ﴿٤٨﴾

29. (Quraanku) waa kitaab aan kugu soo dajinay oo barakeysan, si ay u fiiriyaan dadku aayaadkiisa iyo inay waantoobaan kuwa caqliga leh.

كُتِبَ أَنْزَلْنَاهُ إِلَيْكَ مُبْرَكًا لِيَذَّبَ أَثْمًا لِلَّذِينَ هُمُ يُغْتَابُونَ وَلَا يُذَكِّرُ
أُولَ الْأَلْبَابِ ﴿٢٩﴾

Eebe wuxuu faray Nabi Daa'uud inuu dadka cadaalad ku xukumo mar haduu ka dhigay khaliifka Dhulka oosan raacin hawada Naftiisa markaasna uu dhumo, ciddii Jidka Eebe ka dhuntana waxay mudan Cadaabdan Maalinta soobixinta ay halmameen darteed, Cirka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya Eebe wuxuu u abuuray xigmad iyo Cid walba in lagu abaal mariyo wuxuu kasbaday, saasuuna usoo dajiyey kitaab barakeysan, si loogu waano qaato loona farto, Eebana isku mid kamadhigo Muslim toosan iyo Daalim xun, Xasan Albasri wuxuu yidhi: Eebaan ku dhaartaye Mayna Fiirinin xuruuftoo la xafido iyo xuduudiisana la dayaco, lana dhaho Quraankaan akhriyey isaguna ka muuqan khuluq iyo Camal. şaad (26-29).

30. Waxaan siinnay Nabi Daa'uud (wiilkiisii) Suleymaan ahaa wuxuuna ahaa addeec (Eebe) oo fiican toobad keen badan.

وَوَهَبْنَا لِدَاوُدَ سُلَيْمَانَ نِعَمَ الْعَبْدِ إِنَّهُ أَوَّابٌ ﴿٣٠﴾

31. Xusuuso marka loo bandhigay Casarkii Fardo oradbadaan oo fiicfiican.

إِذْ عَرَضَ عَلَيْهِ بِالْعَظِيِّ الصَّفِيَّتَ الْيَمَانِيَّةَ ﴿٣١﴾

32. Oo markaas uu yidhi ma waxaan ka jeclaan xusidda Eebe xoolo, inta Qor-raxdu ka dhacdo.

فَقَالَ إِنِّي أَحْبَبْتُ حُبَّ الْفَيْرِ عَنْ ذِكْرِ رَبِّي حَتَّى تَوَارَتْ
بِالْحِجَابِ ﴿٣٢﴾

33. ii soo celiya wuxuuna bilaabay inuu ka taabto Dhudhumada iyo Luqunta (uu gawraco sadaqo darteed).

رُدُّوهَُا عَنِّي فَطَّرَفِقُ مَسْحًا بِالسُّوقِ وَالْأَعْنَاقِ ﴿٣٣﴾

34. Dhab ahaan yaan u fidmeynay (imtixaanay) Nabi Suleymaan, waxaana ku tuuray kursigiisii jasad markaasuu toobad keeney.

وَلَقَدْ فَتَنَّا سُلَيْمَانَ وَأَلْقَيْنَا عَلَى كُرْسِيِّهِ جَسَدًا
ثُمَّ أَنَابَ ﴿٣٤﴾

35. Wuxuuna yidhi Eebow ii dambi dhaaf ina sii xukun aan ku habooneyn cid igadambeeysa adaa bixin badane ahe.

قَالَ رَبِّ اغْفِرْ لِي وَهَبْ لِي مُلْكًا لَا يَنْبَغِي لِأَحَدٍ مِّنْ
بَعْدِي إِنَّكَ أَنْتَ الْوَهَّابُ ﴿٣٥﴾

36. Waxaana u sahkirrey dabeysaha iyadoo ku socota amarkiisa iyadoo jilicsan meeshuu doono.

فَسَخَّرْنَا لَهُ الرِّيحَ تَجْرِي بِأَمْرِهِ رُجَاءَ حَيْثُ أَسَابَ ﴿٣٦﴾

37. Shayaadiinta (Xaggeeda waxaan uga sakhiray) mid wax dhisid iyo mid dhunbasha badanda.

وَالشَّيْطَانَ كُلَّ يَمَانٍ وَعَوَاصٍ ﴿٣٧﴾

38. Iyo kuwo kale oo ku xidhxidhan silsilado.

وَأَخْرَجَ الْمُفْرَجِينَ فِي الْأَصْفَادِ ﴿٣٨﴾

39. (Waxaan ku nidhi) tan waa siismadannada ee bixi ama hayso xisaab la'aan.

هَذَا عَطَاؤُنَا قَامُنُ أَوْ أَمْسَاكَ بِعَبْرِ حِسَابٍ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuuna ku leeyahay agtanada dhawaansho iyo noqosho fiican.

وَإِنَّ لَهُ عِنْدَنَا لَوَيْلَىٰ رَحْمَةً مَّتَابٍ ﴿٤٠﴾

Nabi Suleeymaan wuxuu ka dambeeyey oo dhaxlay Nabi Daa'uud wuxuuna ahaa Nabi suuban, Eebana wuxuu u sakhiray makhluuqyadiisa, wuuna imtixaanay wuuna ku guuleystey imtixaankii, wuxuuna Eebe siiyey xukun aan cidkale oo ka dambeeya la siin, wax kasta oo qisa ah oo taaban sharaf Nabinimado oo lagu shakiyana waa wax kama jiraan Fardahana wuxuu u gawracay sadaqo markey ka shuqliyeen daacadii. şaad (30-40).

41. Xusuuso addoonkeygi Ayuub ahaa markuu u dhawaaqay (baryey) Eebihiis isagoo dhihi wuxuu itaabsiiyey shaydaan dhib iyo Cadaab.

وَأَذْكُرْ عَبْدَنَا أَيُّوبَ إِذْ نَادَىٰ رَبَّهُ بِأَنِّي مَسَّيَ الشَّيْطَانُ يَضْحَكُ وَعَدَابٍ ﴿٤١﴾

42. Waxaana ku nidhi ku garaac Lugtaada (dhulka) waxaana ku nidhi kani waa Biyo meydhi ah qabowna lana cabbo.

أَرْكُضْ بِرَجْلِكَ هَذَا مَغْفَسٌ بارِدٌ وَشَرَابٌ ﴿٤٢﴾

43. Waxaana siinnay Caruurtiisii iyo kuwo kale oo lamid ah naxariis xagganaga ka ahaatay iyo xusuus kuwa caqliga led.

وَوَهَبْنَا لَهُ أَهْلَهُ وَمَنْ هُمْ مَعَهُمْ رَحْمَةً مِنَّا وَذِكْرَىٰ لِأُولَىٰ الْأَلْبَابِ ﴿٤٣﴾

44. Kuna qabo gacantaada xidhmo laamo ah kuna garaac hana jabinin dhaarta waxaana ku ognahay inuu yahay samre addoon fiican ah toobadkeenna badan.

وَخُذْ بِيَدِكَ ضِغْتًا فَاصْرِبْ بِهِ وَلَا تَحْنُتْ ۗ إِنَّا وَجَدْنَاهُ صَابِرًا نَقِمَ الْعَبْدَ إِنَّهُ أَوَّابٌ ﴿٤٤﴾

45. Xusuuso addoomadannadii (Nabi) Ibraahim ioyo Nabi Isxaaq iyo Nabi Yacquub ee ku xoog badnaa cibaadada kuna arag dheeraa (xaqa).

وَأَذْكُرْ عَبْدَنَا إِبْرَاهِيمَ وَإِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ أُولَىٰ الْأَيْدِي وَالْأَبْصَارِ ﴿٤٥﴾

46. Anagaa u dooranay xusidda aakhiro.

إِنَّا أَخْلَصْنَاهُمْ بِخَالِصَةٍ ذِكْرَىٰ الدَّارِ ﴿٤٦﴾

47. Waxayna ka yihiin agtanada kuwo la doortay oo wanaagsan.

وَأَنبَأَهُمْ عِنْدَنَا لِمَنِ الْمُصْطَفَيْنَ الْأَخْيَارِ ﴿٤٧﴾

48. Xusuusana Nabi Ismaaciil, Alyasac

وَأَذْكُرْ إِبْرَاهِيمَ إِسْمَاعِيلَ وَالْيَسَعَ وَذَا الْكِفْلِ وَكُلٌّ مِّنَ

iyu Dul - kifli dhamaanna waxay
ahaayeen kuwo wanaagsan.

الْأَخْيَارِ ﴿٤٨﴾

Nabi Ayuub Eebe wuu imtixaamay, Eebena waa ka fayday kurbadii markuu si dhab ah u baryey, cidkastoo Eebe si toosan iyo xaq ah ugu xidhnaatana Eebe wuu aqbali ducadiisa, sidoo kale waxaa Eebe doortey Nabi Ibraahim iyo Nabi Isxaaq, Nabi Yacquub, Nabi Ismaaciil, Yasac iyo Dulkifli dhamaan waxay ahaayeen ikhyaar la doortey, waana in wanaagga iyo adkeysiga lagaya daydaa, Xaqana iyo Quraankana la raaco. şaad (41-48).

49. Waxaas la soo sheegey waa xusuus,
kuwa dhowrsadana waxaa u sugnaaday
noqosho fiican.

هَذَا ذِكْرٌ لِّلْمُتَّقِينَ لِّلْحَسَنِ مَعَابٍ ﴿٤٩﴾

50. Janada cadnin oo loo furay albaa-
bada yey mudan.

جَنَّاتٍ عَدْنٍ مَّفْتَحَةٌ لِّهِنَّ الْآبْوَابُ ﴿٥٠﴾

51. Waxayna ku dangiigsan dhexdeeda
(sariiro) waxayna u yeedhaan faakihad
badan iyo Cabid.

مُتَّكِنِينَ فِيهَا يُدْعَوْنَ فِيهَا بِقَدْحَيْهِمْ كَبِيرَةٍ وَشَرَابٍ ﴿٥١﴾

52. Waxaana agtooda ahaan Haween
indhahoodu ku koobanyahay Ragooda
(dhowrsoon) oo Isla eg.

وَعِنْدَهُمْ قَصْرَاتٌ لِّظَرْفِ الْأَرْبَابِ ﴿٥٢﴾

53. Kaas waxaa leydiin yaboohay Maa-
linta Xisaabta (qiyaamada).

هَذَا مَا أَوْعَدُونَ لِيَوْمِ الْحِسَابِ ﴿٥٣﴾

54. Kaasuna waa Rizqigannaga mana
dhamaado.

إِنَّ هَذَا لَرِزْقُنَا مَا لَهُ مِن نَّفْعٍ ﴿٥٤﴾

55. Xaalku waa sidaas, Gaalana waxaa
u sugnaadey noqosho xun.

هَذَا وَإِنَّ لِلظَّالِمِينَ لَشَرَّ مَعَابٍ ﴿٥٥﴾

56. Jahannamo yeyna gali iyadaana u
xun Gogol.

جَهَنَّمَ يَصْلَوْنَهَا فَيَسَّ الْأَلْجَادُ ﴿٥٦﴾

57. Kaas waa Cadaab, ee dhadhamiya,
isagoo ah Biyo iyo Dhaacaanka ehelu
Naarka.

هَذَا أَقْلِيدٌ وَفَوْهُ حَمِيمٌ وَعَسَاقٌ ﴿٥٧﴾

58. Iyo mid kale oo Cadaab ah oo
noocya ah.

وَأَخْرَجْنَا مِنْ شَكْلِهِ أَزْوَاجًا ﴿٥٨﴾

59. Malaa'igtuna waxay dhihi kani waa
koox idinla gali Cadaabka waxayna ku
dhihi ha soo dhawaanina, waxayna
galaan Naarta.

هَذَا أَقْوَحٌ مَّقْتَحَجٌ مَّعَكُمْ لَأَمْرَجِبًا بِهِمْ
إِنَّهُمْ صَالُوا النَّارِ ﴿٥٩﴾

Aayadaha hore waxay ka warami ehelu Jannaha iyo sida Eebe ugu Nimceeyey, oo waxkastoo khayr ah u helayaan, sidoo kale waxay ka warami Ayadaha kale xaalka ehelu Naarka iyo sida loo duleeyn, iyo waxay isu odhan iyo Cadaabka kala duwan oy lakulmi, Nabiguna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yelee): Haddii Wadaan Qasaaq ah adunka lagu daadiyo adduunyadu way uri laheyd, waxaa wariyey Tirmadi iyo Axmed. şaad (49-59).

60. Waxay ku dhaheen kuwii raacay kuwii madaxda ahaa ha soo dhawaanina (wanaag halla kulmina) idinkaa na soo galiyey Cadaabkan isagaana uxun meel lagu nagaado.

قَالُوا بَلْ أَنشَرْنَا لَكُمْ أَنَّكُمْ أَنشَرْتُمْ وَقَدْ مَسَّوْنَا
فِي سَفْسِ الْقَرَارِ ﴿٦٠﴾

61. Waxayna dheheen kuwii wax raacay Eebow ruxii nasoo galiyey Cadaabkan u siyaadi laban laab Naarta.

قَالُوا رَبَّنَا مَنْ قَدَّمَ لَنَا هَذَا فَرِيدَهُ عَدَابًا ضَعْفًا
فِي النَّارِ ﴿٦١﴾

62. Waxayna dhaheen (Madaxdii) Gaalada maxaan la arkiweyney rag aan ku tirinay kuwo xun xun.

وَقَالُوا مَا لَنَا لَنَرِي رِجَالًا كَمَا كُنَّا نَعُدُّهُمْ مِّنَ الْأَشْرَارِ ﴿٦٢﴾

63. Ma waxaan ka yeelanay (adduunkii) Jees jees mise waxaa ka iishey xaggooda Aragii.

أَتَخَذْتُمْ لَهُمْ سِحْرِيًّا أَمْ أَزَاغَتْ عَنْهُمْ الْأَبْصَارُ ﴿٦٣﴾

64. Kaasina (doodaas) waa xaq sugan oo ah dooda ehelu naarka.

إِنَّ ذَٰلِكَ لِحَقُّ نِقَاصِ أَهْلِ النَّارِ ﴿٦٤﴾

65. Waxaad dhahdaa Nabiyouw waxaan uun ahay dige, ilaah Xaq lugu caabudo oon Allah ahayn Majiro ee kaliga ah awoodana badnaa.

قُلْ إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ وَأَنَّ اللَّهَ إِلَهُ الْوَالِدِينَ وَاللَّهُ الْوَحْدُ الْقَهَّارُ ﴿٦٥﴾

66. Ee ah Eebaha samooyinka iyo dhulka iyo waxa udhaxeeyaba, ahna adkaade dambidhaaf badan.

رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا الْعَزِيزُ الْغَفَّارُ ﴿٦٦﴾

Aayadaha hore waxay ku xidhanyihiin kuwii ka horeeyey ee ku saabsanaa muranka iyo calaacalka ehelu Naarka Maalinta Qiyaame iyo sidey kuwii xumaanta wax kuraacay iyo kuway raaceenba isu dagaalayaan midba midka kale, iyo iney gafsanaayeen markey ku jees jeesayeen adduunkii mu'miniinta sida Bilaal, Suhayb, Cammar iyo wixii la mid ahaa.

Aayadaha dambana waxay ka warami awoodda Eebe iyo kalinimadiisa iyo in isagu koonka leeyahey, Nabiguna udigaha Caalamka yahay. şaad (60-66).

67. Waxaad dhahdaa Nabiyouw Quraan-ku waa war weyn.

قُلْ هُوَ تَوَكَّلْ عَلَىٰ عَظِيمٍ ﴿٦٧﴾

68. Ood idinku ka jeedsaneysaan.

أَنشَرْتُمْ عَنْهُ مَعْرُوضُونَ ﴿٦٨﴾

69. mana ogayn shirka sare (malaa'igtu) markey doodayaan (Haddaan waxyi jirin).

مَا كَانَ لِي مِنْ عِلْمٍ بِالْمَلَائِكَةِ إِذْ يَخْتَصِمُونَ ﴿٦٩﴾

70. waxaa uun leywaxyoodey inaan ahay dige muuqda.

إِنْ يُوحَىٰ إِلَيَّ إِلَّا الْمَآءُ النَّازِبُ مُرْتَبِّدٌ ﴿٧٠﴾

71. Xusuuso markuu Eebe ku yidhi malaa'igta anigu waxaan ka abuuri dadka (Aadam) Dhoobo.

إِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَائِكَةِ إِنِّي خَلَقْتُ بَشَرًا مِنْ طِينٍ ﴿٧١﴾

72. Ee markaam ekeeyo oon ku afuufo Ruuxdeyda ugu dhaca sujuud (salaan).

فَإِذَا اسْتَوَيْتُهُمْ نَفَخْتُ فِيهِمْ مِنْ رُوحِي فَقَعُوا لَهُمْ سَاجِدِينَ ﴿٧٢﴾

73. Wayna sujuudey malaa'igtii dha-maantood oo idil.

فَسَجَدَ الْمَلَائِكَةُ كُلُّهُمْ أَجْمَعُونَ ﴿٧٣﴾

74. Iblis mooyee oo is kibriyey kana mid noqday gaalada.

إِلَّا إِبْلِيسَ اسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ ﴿٧٤﴾

75. Eebe wuxuu yidhi Iblisow maxaa kaa reebay inaad u sujuuddo kaan ku abuuray gacantayda ma iskibriyey mise waxaad ka mid noqotay kuwa islasar-reeya.

قَالَ يَا إِبْلِيسُ مَا مَنَعَكَ أَنْ تَسْجُدَ لِمَا خَلَقْتُ بِيَدَيَّ ۗ إِنَّكَ كَبَّرْتَ مِنْ الْعَالِينَ ﴿٧٥﴾

76. Wuxuuna yidhi anaa ka kheyroon isaga (adam), waxaad iga abuurtey naar isagana waxaad ka abuurtey dhoobo.

قَالَ أَنَا خَيْرٌ مِنْهُ خَلَقْتَنِي مِنْ نَارٍ وَخَلَقْتَهُ مِنْ طِينٍ ﴿٧٦﴾

77. Eebe wuxuu ku yidhi iiga bax samadeyda, waxaad tahay mid la dheereeye.

قَالَ فَأَخْرِجْهَا فَإِنَّكَ رَجِيمٌ ﴿٧٧﴾

78. Korkaagana ha ahaato lacanade tan iyo maalinta abaalmarinta.

وَإِنَّ عَلَيْكَ لَعْنَتِي إِلَىٰ يَوْمِ الدِّينِ ﴿٧٨﴾

Quraanku waa war weyn gaaladuna waa ka jeedsadeen Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe hayeelee) waa uun dige cad oo waxyi Eebe wax lagu ogeysiinyey. Waxaa kale ooy aayaduhu ka warameen Nabi aadam (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) iyo Iblis sida meelo badan Quraanku kusheegey, taasoo ah inuu Iblis iskibriyey xaqana diiday amarkii Eebena ka madax adaygay waxaana lagu abaal mariyey in naxariistii Eebe laga dheereeyey Eebena u cadhooday cid kastoo raacda oo xaq iska weyneysana waxay mudan wuxuu mutay Iblis. şaad (67. 78).

79. Wusuu yidhi (iblis) Eebow i sug tan iyo maalinta la soo bixin dadka.

قَالَ رَبِّ فَأَنْظِرْنِي إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ ﴿٧٩﴾

80. Eebe wuxuu yidhi waxaad ka midtahay kuwa la sugi.

قَالَ فَإِنَّكَ مِنَ الْمُنْظَرِينَ ﴿٨٠﴾

81. Tan iyo maalinta waqtiga layaqaan ah.

إِلَى يَوْمِ الْوَقْتِ الْمَعْلُومِ ﴿٨١﴾

82. Wuxuuna yidhi waxaan ku dhaartey sharaftaadee waan baadiyeyn dha-maantood.

قَالَ فَبِعِزَّتِكَ لَأُغْوِيَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٨٢﴾

83. marka laga reebo addoomadaada suuban.

إِلَّا عِبَادَكَ مِنْهُمُ الْمُخَاصِينَ ﴿٨٣﴾

84. Eebe wuxuu yidhi dhabtaan kusi-foobaa, dhabtaana uhadlaa.

قَالَ فَالْحَقُّ وَالْحَقُّ أَقْوَلُ ﴿٨٤﴾

85. Waxaana ku dhaaran inaan kabuu-xiyo Jahannamo adiga iyo inta kuraac-da oo ka midah dadka dhamaan.

لَأَمْلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنْكَ وَمِمَّن تَبِعَكَ مِنْهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٨٥﴾

86. Waxaad dhahdaa Nabiyow idin kama warsanaayo xaqa ujuuro, mana ihi kuwa is dhiba (isku dhiba waxaan la farin).

قُلْ مَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ وَمَا أَنَا مِنَ الْمُتَكَلِّفِينَ ﴿٨٦﴾

87. Waxyiguna waxaan waanada caa-lamka ahayn ma aha.

إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ لِلْعَالَمِينَ ﴿٨٧﴾

88. Dhab ahaanna waxaad u ogaan doontaan warkiisa muddo ka dib.

وَلَتَعْلَمَنَّ بَنَاهُ بَعْدَ حِينٍ ﴿٨٨﴾

Xigmo Eebe ogyahay yuu u ogolaaday codsigii Iblis oo ahaa in cimriga loo dheereeyo. Wuxuuna ku dhaartey colkaas inuu dadka dhumiyo marka laga reebo kuwa wanaagsan. Eebena wuxuu ku ballan qaaday inuu cadaabo Iblis iyo inta raacda. Tan kale ma aha manahaboona iney noqoto diintu wax ujuuro iyo cunno lagu warsado, lana sheegto waxaanan aheyn, ama leysku dhibo waxaan lagu farin. Quraankuna waa waanada iyo naxariista addunka oo dhan, ayna waajib tahay in la raaco laguna dhaqmo, haddii kale waxaa dhab ahaan loo ogaan warkiisa. şaad (79-88).



Suurat Az-Zumar

سُورَةُ الزُّمَرِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

1. Soo dajinta Kitaabka (Quraanka) wuxuu ka ahaadey xagga Eebaha adkaada ee falka san.

2. Annagaana kuugu soo dajinay Nabiyow Kitaabka si xaq ah, ee caabud Eebe adoo u kali yeeli Diinta.

3. Diinta khaaliska ahna waxay u sugnaatey Eebe, kuwa ka yeesha Eebe ka sokow awliyo waxay odhan uma caabudno inay Eebe noo dhaweeyaan mooyee dhawaansho, Eebaana kala xukumi dadka dhexdooda waxay isku diidaan, Eebana ma hanuuniyo Been badane gaalnimobadan.

4. Hadduu doono Eebe inuu yeesho ilmo wuxuu ka dooran lahaa wuxuu abuuru wuxuu doono, waa nazahanyahay, waana Eebaha kalida ah ee awoodda badan.

5. Isagaa abuuray samooyinka iyo dhulkaba si dhab ah, wuxuuna Habeenka ku daboolaa Maalinta, Maalintana ku daboolaa Habeenka, wuxuuna sakhiray Qorraxda iyo Dayaxa, mid walbana wuxuu ku socdaa muddo magacaaban, Eebana waa adkaade dambi dhaafbadan.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

تَنْزِيلَ الْكِتَابِ مِنَ اللَّهِ الْعَزِيزِ الْحَكِيمِ ﴿١﴾

إِنَّا أَنْزَلْنَا إِلَيْكَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ فَاعْبُدِ اللَّهَ مُخْلِصًا لَهُ الدِّينَ ﴿٢﴾

أَلَا لِلَّهِ الدِّينُ الْخَالِصُ وَالَّذِينَ اتَّخَذُوا مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءَ مَا نَعْبُدُهُمْ إِلَّا لِيُقَرِّبُونَا إِلَى اللَّهِ زُلْفَىٰ إِنَّ اللَّهَ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ فِي مَا هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي مَنْ هُوَ كَاذِبٌ كَفَّارٌ ﴿٣﴾

لَوْ رَادَ اللَّهُ أَنْ يَتَّخِذَ وَلَدًا لَأَصْطَفَىٰ مِمَّا يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ سُبْحٰنَهُ هُوَ اللَّهُ الْوَاحِدُ الْقَهَّارُ ﴿٤﴾

خَلَقَ السَّمٰوٰتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ يُكَوِّرُ اللَّيْلَ عَلَى النَّهَارِ وَيُكَوِّرُ النَّهَارَ عَلَى اللَّيْلِ وَسَخَّرَ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ كُلٌّ يَجْرِي لِأَجَلٍ مُّسَمًّى ﴿٥﴾
أَلَا هُوَ الْعَزِيزُ الْعَفِيفُ ﴿٦﴾

Eebe wuxuu ka waramey sida meelo badan aan ku soo marray sharafta Quraanka iyo weynidiisaba, maxaayeeley waxaa soo dajiyey ooku hadley Eebaha weyn ee xigmada badan, sidaas daraadeed yey waajib tahay in la raaco Quraankaas Eebana si dhab ah loo caabudo, ciddii caabudaa wax isaga ka soo hadhayna waxay la kulmi khasaare iyo qoomamo, maxaayeeley Eebe waxaa loogu dhawaadaa Camal fiican, mana liibaano beenaale iyo gaal midna. Eebana waa ka kaaftoonyahay inuu yeesho ilmo, hadduu

doonana waxuuu ka yeelan lahaa wuxuu rabo, waase ka nasahanyhay umana baahna, maxaayeeley waa Eebaha awooda leh ee abuuray Cirka, Dhulka, habeenka, Maalinta, Qoraxda iyo dayaxaba dhammaantoodna u sakhirey sidii loo abuurey. Az-Zumar (1-5).

6. Wuxuu idinka abuurey naf kaliya (Nabi aadam) markaasuu Eebe ka yeeley (ka abuurey) xagga aadam ha-weeneydiisi (Xaawo) wuxuuna Eebe idiin soo dajiyey xoolaha siddeed nooc oo ka mid ah, wuxuuna idinku abuurey uurka hooyadin abuurid ka dambeysa abuurid saddex mugdi dhexdooda saas-na waxaa yeela Eebaha idin barbaariya, isagaana iska leh xukunka, macbuud xaq ah majiro Allaah mooye, ee xaggee laydiinka iili (Xaqa).

خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ فَمُنَّجَعَلْ مِنْهَا زَوْجَهَا
وَأُنزِلْ لَكُمْ مِنْ الْأَنْعَامِ مَمْدِينَةً أَرْوِجَ بِخَلْقِكُمْ
فِي بَطْنِ أُمَّهَاتِكُمْ خَلْقًا مِمَّنْ بَعْدَ خَلْقِ فِي ظُلُمَاتٍ
ثَلَاثٍ ذَٰلِكُمْ اللَّهُ رَبُّكُمْ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ
فَإِنِّي نَصَرْتُ فُوتَ ﴿٦﴾

7. Haddaad gaalowdaan dadow Eebe waa idinka kaaftoomay, ugamana raalli aha addoomadiisa gaalnimo, hadaad ku mahdisaanna wuu idin ka raalli noqon, nafna naf kale danbigeeda ma qaaddo, waxaana leydiin celin Eebihiiin xagiisa, wuxuuna idiin ka warrami waxaad camal fasheen, wuuna ogyahey waxa laabta (qalbiga) ku sugan.

إِن تَكْفُرُوا فَإِنَّ اللَّهَ عَنِّي وَعَنْكُمْ
وَأَنْتُمْ كُفْرًا تَكْفُرُونَ تَشْكُرُوا لَكُمْ وَلَا تَنْزِيلُ
وَأَزْرَةٌ وَذُرْءٌ أُخْرَىٰ شُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمْ مَرْجِعُكُمْ
فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ إِنَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ
الصُّدُورِ ﴿٧﴾

8. Markuu dadka taabto dhib wuxuu baryaa Eebihiiis isagoo u noqon, markuuse Nicmo siiyo wuu illoobaa wuxuu baryey horey, wuxuuna u yeelaa Eebe shariigyo si uu uga baadiyeeyo (kaasi) jidka Eebe, waxaad dhahdaa ku raaxayso gaalnimadaada wax yar waxaad ka mid tahay ehelu naarke.

﴿ وَإِذَا مَسَّ الْإِنْسَانَ ضُرٌّ دَعَا رَبَّهُ مُنِيبًا إِلَيْهِ ثُمَّ إِذَا
خَفِيَ رَيْعَةً مِنْهُ لَيْسَ بِمَا كَانَ يَدْعُو إِلَيْهِ مِنْ قَبْلُ
وَجَعَلَ لِلَّهِ أَنْدَادًا لِيُضِلَّ عَنْ سَبِيلِهِ قُلْ فَتَنَّا
بِكُمْ لَعَلَّ تَتَّقُونَ ﴿٨﴾

Wuxuu Eebe halkan ku taxay nicmooyin badan oos u nicmeeyey addoomadiisa, taasoo ah abuuriddiisa Xoolaha uu inoo ahuurey, uurka hooyoo inagu nooleeyey inaguna abuuray mugdiho saddex ah dhexdood, hadduu dadkoo dhan gaaloobana Eebe wax ma yeeleyso, mana rabo gaalimo mahadoodana wuu jecelyahay nafna mid kale danbigeed ma qaaddo, xagga Eebaana loo noqon ruux walbana wuxuu uga warrami wuxuu camal faley, illeen waxwalba waa ogyahay, mana haboona in dhibkana Eebe la xusuusto ladnaantana la halmaamo loona yeelo shariigyo, cidda saas yeeshana waxyarbey aduunka ku raaxaysan Naarna way gali. Az-Zumar (6-8).

9. Ruux tukan oo Eebe adeece saacadaha habeenka isagoo sujuudsan oo taagan kana digtoon aakhiro quudarreynayana naxariista Eebihiis (Ma la midbaa cidaan saas faleynin).

waxaad dhahdaa Nabiyouw ma egyihiin kuwa wax yaqaanna iyo kuwaan wax aqoonin, waxaa uun waantoomi kuwa caqliga leh.

10. Waxaad dhahdaa Nabiyouw addoomadeyda xaqa rumeeyow ka dhowrsada Eebihiin, ciddii wanaag fashana addoomadeyda waxaa usugnaadey wanaag, dhulka Eebena waa waasac (ee ku caabuda) waxaa uun loo oofiyaa (dhameyaa) kuwa samra ajrigooda xisaab la'aan.

11. Waxaad dhahdaa Nabiyouw waxaa lay faray inaan caabudo Eebe anoo u kali yeeli diinta.

12. Waxaana ley faray inaan noqdo kan ugu horreeya muslimiinta.

Dhab ahaan ma sinna mana eka ruux Eebe kayaaba kuna dadaala khayrka iyo wanaagga iyo mid xummanta qasta oon Eebaba xusuusan, sideyna u ekeyn ruux kilmi wax anfaa oos Eebbe ugu dhawaado yaqaan iyo mid jaahil ah oon wax aqoon iskana dhaga la' sidookale ma eka ruux caqli badan oo Eebe iyo abaalmarintiisa xusuusan iyo midaan xilba iskasaarin. Eebana wuxuu faray addomadiisa inay ka dhawrsadaan, wanaagna falaan si ay wanaagga uheleen, samirkooda ajirkiisana xisaab la'aan loogu oofiyo, caabudidana loo kali yeelo Eebe isagoo lagu dayan (Nabiga naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) madaxda iyo hanuunka u ahaa umadda Imaam Awsaaci wuxuu yidhi: Kuwa samra ajriga looma miisaamo loomana miiso ee waa loo daraa. Az-Zumar (9-12).

13. waxaad dhahdaa Nabiyoow anigu waxaan ka cabsan hadaan caasiyo Eebahay cadaab maalin weyn.

14. Waxaad dhahdaa Eebe uun baan caabudi anoo ukaliyeeli Diintayda.

15. Ee caabuda Gaaloy waxaad doontaan Eebe ka sokow, waxaadna dhahdaa kuwa khasaaray waa kuwa

أَمَّنْ هُوَ قَلْبُكَ إِتَاءَ الْبَيْتِ سَاجِدًا وَقَائِمًا يَخْذُرُ
الْآخِرَةَ وَيَرْجُو رَحْمَةَ رَبِّهِ قُلْ هَلْ يَسْتَوِي الَّذِينَ
يَعْلَمُونَ وَالَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُولُو
الْأَلْبَابِ ﴿٩﴾

قُلْ يٰعِبَادِ الَّذِينَ ءَامَنُوا اتَّقُوا رَبَّكُمْ لِلَّذِينَ
أَحْسَنُوا فِي هَذِهِ لَأَنْبِيَ حَسَنَةٌ وَأَرْضُ اللَّهِ
وَسِعَةٌ إِنَّمَا يُوَفَّى الصَّابِرُونَ أَجْرَهُمْ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿١٠﴾

قُلْ إِنِّي أُمِرْتُ أَنْ أَعْبُدَ اللَّهَ مُخْلِصًا لَهُ الدِّينَ ﴿١١﴾

وَأُمِرْتُ لِأَنْ أَكُونَ أَوَّلَ الْمُسْلِمِينَ ﴿١٢﴾

قُلْ إِنِّي أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّي عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٣﴾

قُلْ اللَّهُ أَعْبُدُ مُخْلِصًا لَهُ الدِّينَ ﴿١٤﴾

فَأَعْبُدُوا مَا شِئْتُمْ مِنْ دُونِهِ قُلْ إِنَّ الْخَاسِرِينَ الَّذِينَ
خَسِرُوا أَنْفُسَهُمْ وَأَهْلِيهِمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ أُولَٰئِكَ هُوَ

khasaariyey Naftooda iyo Ehelkoodii Maalinta Qiyaame, taasina waa khasaaraha cad.

أَحْسَرْنَا الْمَعِينُ ﴿١٥﴾

16. Korkooda waxaa ah lakabyo Naar ah, hoostoodana waxaa ah lakabyo Naar ah, kaasina waa waxa Eebe ku cabsi galiyo (ugu digo) addomadiisa ee addomadeydoow iga dhawrsada.

لَهُمْ مِنْ وَفْقِهِ ظُلُمٌ مِنَ النَّارِ وَمِنْ تَحْتِهِمْ ظُلَلٌ إِنَّكَ يَخُوفُ اللَّهُ بِهِ عِبَادَهُ لِيُعْبَادَ فَإِن يَقُولُونَ ﴿١٦﴾

17. Kuwa ka fogaaday inay caabudaan shaydaan (iyo xuma fare) oo Eebe u noqday waxaa usugnaaday Bishaaro ee u bishaaree addoomadayda.

وَالَّذِينَ اجْتَنَبُوا الظُّلُمَاتِ أَن يَبُدُّوهُمَا وَأَنَا بَوَالِي أَلَّهِ لَهُمُ الْبُشْرَىٰ فَبَشِّرْ عِبَادِ ﴿١٧﴾

18. Ee ah kuwa dhageysta hadalka oo raaca kiisa fiican, kuwaasna waa kuwa Eebe hanuuniyey, kuwaasna iyaga uunbaa ah kuwa caqliga leh.

الَّذِينَ يَسْتَمِعُونَ الْقَوْلَ فَيَتَّبِعُونَ أَحْسَنَهُ أُولَٰئِكَ الَّذِينَ هَدَاهُ اللَّهُ وَأُولَٰئِكَ هُمْ أُولُوا الْأَلْبَابِ ﴿١٨﴾

Hadduu Eebe faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelec) inuusan Eebe khilaafin cibaadadana ukali yeelo waxay kutusin inuu dadka kalena ka daranyahay, Jidkuna waa cadyahay cidwalbana wa aragtaa, waxaase khasaara dhab ah ku dhacday kuwa ay kala tagaan isna waayaan Ehelkoodii maalinta qiyaame Naarna galaan, waana khasaare mid la mid ah uusan jirin mar haday Naaru kor iyo hoosba ka koobtay, kuwa mu'iniinta dhabta ah ee caqliga badan Bishaarada muta waa kuwaan raacin caabudinna wax Eebe ka soohadhay oo shaydaan kasta ah iyo wax kastoon xaq ahayn, Aayadduna waxay ka digi in xumaanleysku raaco.

Ibnu Cabaas waxaa laga wariyey kuwaasi waa kuwa markeq maqlaan xumaan iyo samaan ka warrama samaanta, kana taga xumaanta oon ka sheekeeynin. Az-Zumar (13-18).

19. Ruuxay u waajibtay ereyga cadaab ma adaa Nobiyooow ka korin cid Naar gali.

أَفَمَن حَقَّ عَلَيْهِ كَلِمَةُ الْعَذَابِ أَفَأَن تَسْتَقْدَمَ فِي النَّارِ ﴿١٩﴾

20. kuwa ka dhawrsaday Eebahoodse waxay mudan Qawlado (Janno) oo qawlada kale ka kooreeyaan sifiicanna (udhisan), waxaana dhexsocda Wa-biyaalkii, waana yabooh Eebe, mana baajiyo Eebe yaboohissa.

لَكِنِ الَّذِينَ اتَّقَوْا رَبَّهُمْ لَهُمْ عُرفٌ مِّنْ وَفْقِهِا عُرفٌ مَّبِينَةٌ تَجْرِي مِّنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ وَعَدَّ اللَّهُ لَا يَحْتَلِفُ أَلَّهُ الْيَعْبَادَ ﴿٢٠﴾

21. Miyaadan arkeyn in Eebe ka soodajiyey samada biyo oo markaas uu galin dhulka iyagoo ka soo burqan dhulka, markaasna Eebe ku soo bixin Beer midabkeedu kala duwanyahay

أَفَرَأَىٰ أَن الله أَنزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَسَالَتْ مَاءً يُسَالِحُ فِي الْأَرْضِ ثُمَّ يُخْرِجُ بِهِ زَرْعًا مُّخْتَلِفًا أَلْوَانُهُ ثُمَّ يَهيجُ فَتَرْتَهُ مَضْضًا ثُمَّ يَجْعَلُهُ حُطْلًا

markaas ka dibna uu inagagi ood arki isagoo cawlan, kadibna kayeeli bur bur, arrintaasna waxay xusuus u tahay kuwa caqliga leh.

إِنَّ فِي ذَلِكَ لَذِكْرٍ لِّأُولِي الْأَلْبَابِ ﴿٢١﴾

22. Ruux Eebe uwaasiciyey Laabtiisa Islaamka oo nuurka Eebe ku sugan ma lamidbaa (mid la daboolay) halaag wuxuu u sugnaaday kuwey ka ingagtay quluubtoodu xuska Eebe (Quraanka) kuwaasina wa kuwa baadi cad kusugan.

أَفَمَنْ شَرَحَ اللَّهُ صَدْرَهُ لِلْإِسْلَامِ فَهُوَ عَلَىٰ نُورٍ مِّنْ رَبِّهِ ۗ قَوْلًا لِّلْقَلْبِ سَيِّئَةٍ وَلَوْ هُمْ مِّنْ ذِكْرِ اللَّهِ أَتَوْا لَكَ فِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ ﴿٢٢﴾

Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu Eebe faray inuu dadka xaqa gaadhsiiyo, korkiisase ma saara inuu xoog wax ku hanuuniyo ama cid naaru u waajibtay koriyo, kuwa Eebe ka dhawrsadase waxay mudan wanaag iyo darajooyin Janno, Eebana ma baajiyoo yaboohiisa. Awoodda Eebana waxaa kutusin siduu Roobka u keeno cunanna ugu soobixiyo, arintaasina waa waxay ku waana qaataan kuwa caqliga badan. Ruuxii Eebe hanuuniyana oo qalbiga uwaasiciyo la mid ma aha mid dhumay. Ibnu Kathiir wuxuu yidhi waxaa liibaanay Ruuxii xaalkiisu wanaag ku dhamaado. Az-Zumar (19-22).

23. Eebaa soo dejiyey kan ugu fiican hadal, kitaabuu soo dajiyey isu eg. oo soo noqnoqda, ay lana qamandhacyooto Jidhka kuwa ka yaaba Eebahood, markaasay la jilci Jidhkoodu iyo quluubtoodu xusuusta Eebe, arrintaasuna waa hanuunka Eebe uu ku hanuuniyo cidduu doono, ruuxuu Eebe dhumiyana ma jiro cid hanuunin.

اللَّهُ نَزَّلَ أَحْسَنَ الْكِتَابِ كِتَابًا مُّتَشَابِهًا مَّثَانِي تَشْجُرُ مِنْهُ جُلُودَ الَّذِينَ يَخْشَوْنَ رَبَّهُمْ ثُمَّ تَلِينُ جُلُودُهُمْ وَقُلُوبُهُمْ إِلَىٰ ذِكْرِ اللَّهِ ۗ ذَلِكَ هُدَىٰ اللَّهِ يَهْدِي اللَّهُ لِمَنْ يَشَاءُ ۗ وَمَنْ يُضِلِلِ اللَّهُ فََمَا لَهُ مِنْ هَادٍ ﴿٢٣﴾

24. Ma ruus wajigiisa kaga gabada cadaab xun maalinta qiyaame mala midbaa mid aan saas ahayn, waxaana loo yidhaa daalimiinta dhahamiya waxaad kasban Jirteen, (abaalkiisii).

أَفَمَنْ يَتَّقِ بِرَبِّهِ ۖ سَاءَ الْعَذَابُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ۗ وَقِيلَ لِلظَّالِمِينَ دُفَعُوا مَا كُنْتُمْ تَكْسِبُونَ ﴿٢٤﴾

25. Waxaa beeniyey (xaqa) kuwii ka horreeyey (gaaladan) wuxuna uga yimid cadaabku meelayn kasayn.

كَذَّبَ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَاتَّبَعَتْهُمْ الْعَذَابُ مِنْ حَيْثُ لَا يَسْعُرُونَ ﴿٢٥﴾

26. Markaasuu Eebe dhadhansiiyay dulli nolasha adduunyo, cadaabka aakhiraana weyn hadday wax garan.

فَأَذَانُ اللَّهِ يُسْمِعُ الَّذِينَ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَالْعَذَابُ الْأَخِيرَ ۗ كَسِبُوا لَوْلَا يُعَامُونَ ﴿٢٦﴾

Eebaa soo dajiyey Quraan ugu fiican uguna Runbadan hadal isagoo isu eg sona noqnoqda akhrishiisana mu'miniintu lacabsato, kuna faraxdo, hanuunkuna wuxuu ku jiraa awoodda Eebe ee weyn, waase in xaqa lagu dadaalo mana sinna ruux cadaabka waji waji ugu dhici iyo mid Janada ku dhexmushaaxi. cidwalbana waxay la kulmi waxay hormarsatay, daalimiintuna waxay mudan cadaab daran, Gaaladuna ama ha horeeyo ama ha dambeeyee waxaa caadadooda ka mid ah xaq diiyo madax adeyg xun, miyeyse ka nabadgali ciqaabta Eebe taasoo uga imaan meeleyn filayn iyo duli adduun iyo aakhiroba, Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Gaalada waxaa lala aadi Naarta iyagoo Gacmuhu xidh xidhanyihiin markaasaa lagu tuuri Naarta wax naartu taabatana waxaa ugu horeeyn wajigooda. Az-Zumar (23-26).

27. Dhabbaan ugu caddayney dadka Quraanka tusaale kasta inay waantoo-baan.

وَلَقَدْ صَرَبْنَا لِلنَّاسِ فِي هَذَا الْقُرْآنِ مِنْ كُلِّ مَثَلٍ
لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٢٧﴾

28. Waana Quraan carabi ku (qoran) oon qalooclahayn inay dhawrsadaan.

قُرْآنًا عَرَبِيًّا عَزِيزًا يُوعَىٰ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿٢٨﴾

29. Eebe wuxuu qadaray tusaale nin dad wadaagan iskuna khilaafsan iyo mid usugnaada ruux si gaar ah ma egyihiin tusaale ahaan. mahad Eebaa iska leh dadka badidiisna ma oga.

صَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا رَجُلًا فِيهِ شُرَكَاءُ مُتَشَاكِسُونَ
وَرَجُلًا سَلَمًا لِرَجُلٍ هَلْ يَسْتَوِيَانِ مَثَلًا الْحَمْدُ لِلَّهِ
بَلْ أَعْتَرُوهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢٩﴾

30. Adigu waad dhiman iyaguna (Gaaladu) way dhiman.

إِنَّا كُنَّا مَيِّتٌ وَإِنَّهُمْ مَيِّتُونَ ﴿٣٠﴾

31. Markaas maalinta qiyaame waxaad ku doodaysaan Eebihii agtiisa.

ثُمَّ إِنَّا كُنَّا يَوْمَ الْقِيَامَةِ عِنْدَ رَبِّكُمْ تَخْتَصِمُونَ ﴿٣١﴾

32. Yaa ka dulmi badan Ruux Ku been abuurtey Eebe korkiisa oo beeniyey runta (Xaqa) markuu uyimid, miyeyna ahayn Jahannamo Guriga Gaalada.

* فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ كَذَبَ عَلَى اللَّهِ وَكَذَبَ
بِالْصِّدْقِ إِذْ جَاءَهُ ۗ هَؤُلَاءِ فِي جَهَنَّمَ مَثْوًى
لِلْكَافِرِينَ ﴿٣٢﴾

33. Kii la yimid Runta iyo kii rumeeyey waa dhawrsadeen.

وَالَّذِي جَاءَ بِالصِّدْقِ وَصَدَّقَ بِهِ ۗ أُولَٰئِكَ هُمُ
الْمُتَّقُونَ ﴿٣٣﴾

34. Waxayna ku leeyihiin Eebe agtiisa waxay doonaan taasina waa abaalmarinta kuwa wanaagga fala.

لَهُمْ مَا يَشَاءُونَ عِنْدَ رَبِّهِمْ ۗ ذَٰلِكَ جَزَاءُ
الْمُحْسِنِينَ ﴿٣٤﴾

35. Si Eebe uga asturo wixii xumaa oy camal faleen, kuna abaal mariyo ajirkii ugu fiicnaa waxay falayeen.

يُنكَفِرُ اللَّهُ عَنْهُمْ أَسْوَأَ الَّذِي عَمِلُوا وَيَجْزِيهِمْ
أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ الَّذِي كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٣٥﴾

Quraankan wax badan baa lagu soo cel celiyay cadaymo iyo tusaalooyin badan si loogu waantoomo, isagoo ah Quraan fasiix ah Carabina ku qoran mana sinna wax dad isdiidan ka dhaxeeya iyo wax cid kali ah ugaar ah, saasayna u ekeyn mu'min iyo Gaal iyo camalkooda, xaalkuna wuxuu ku dhamaan in la dhiman muslim iyo Gaalba' markaas lagu doodi Eebe agtiisa, wax la dulmi ahna ma jiro cid Eebe ku been abuuratay xaqa uyimidna beenisay waxayna ku hoyan Naarta Jahannamo. Kiise xaqa la yimid oo

ah Nabiga iyo Nabiyadii kale iyo kuwii rumeeyeyba waa kuwo Eebe ka yaaba xumaantana ka dhawrsada waxayna mudan wanaag iyo sharaf, Rasuulkuna wuxuu yidhi: (naxariis iyo nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelce) waxaa la kicin Qiyaamada madaxdoodii oo khaa'in ah waxaana la doodi dadkiisii wayna ka guuleysan markaasaa lagu odhan waxaad awdaa dhan ka mid ah dhinacyada Jahannamo (Naarta gal) waxaa wariyey Bazaar. Az-Zumar (27-35).

36. Miyuusan ahayn Eebe kufillaha addoonkiisa, waxay kugu cabsi galin waxa Eebe ka soo hadhay (ay caabudi) ruux Eebe dhumiyeyna ma laha cid hanuunin.

أَلَيْسَ اللَّهُ بِكَافٍ عَبْدَهُ وَيُخَوِّفُونَكَ بِالَّذِينَ
مِنْ دُونِهِ وَمَنْ يُضِلِلِ اللَّهُ فَمَا لَهُ مِنْ هَادٍ ﴿٣٦﴾

37. Cid Eebe hanuuniyeyna ma jiro wax dhummin, Eebana miyuusan ahayn adkaade aarsada.

وَمَنْ يَهْدِ اللَّهُ فَمَا لَهُ مِنْ مُضِلٍّ أَلَيْسَ اللَّهُ
بِعَزِيزٍ ذِي انْتِقَامٍ ﴿٣٧﴾

38. Hadaad warsato Gaalada yaa abuuray Cirka iyo Dhulka waxay odhan Eebe, waxaad dhahdaa bal ka warrama waxaad caabudaysaan Eebe ka sokow hadduu ila doono Eebe dhib miyey yihiin kuwa fayda dhibka ama hadduu ila doono naxariis ma joojin karaan naxariistiisa, waxaad dhahdaa waxaa i kaafiya Eebe ee korkiisa ha tala saar-teen kuwa tala saaran.

وَلَيْن سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ
لَيَقُولُنَّ اللَّهُ قُلْ أَفَرَأَيْتُمْ مَا تَدْعُونَ مِنْ دُونِ
اللَّهِ إِنْ أَرَادَنِيَ اللَّهُ بِضُرٍّ هَلْ هُنَّ كَاشِفَاتُ
ضُرَّتِهِ أَوْ أَرَادَنِي بِرَحْمَةٍ هَلْ هُنَّ مُمْسِكَاتُ
رَحْمَتِهِ قُلْ حَسْبِيَ اللَّهُ عَلَيْهِ يَتَوَكَّلُ
الْمُتَوَكِّلُونَ ﴿٣٨﴾

39. Waxaad dhahdaa qoomkayoow sidaadtihiin u camalfala anna waan camal faliye waadna ogaandoontaan.

قُلْ يَقَوْمِ اعْمَلُوا عَلَىٰ مَكَاتِبِكُمْ لِي إِلَىٰ عَمَلِ
فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٣٩﴾

40. Ruuxu u yimaado cadaab dulleeya oo ku dago korkiisa cadaab joogta ah.

مَنْ يَأْتِ عَذَابَ يَجْزِيهِ وَيَحْمِلْ عَلَيْهِ عِدَابًا
مُفْسِمًا ﴿٤٠﴾

Eebaha awoodda leh waa ku filanyahay addoomadiisa mana aha in dadka lagu cabsigaliyo waxa ka soohadhay, hanuun iyo dhumidba waa awood Eebe, wuxuu doono yuuna falaa cidduu doonana wuu ka aarsadaa, Gaalana waa ogyihiin in Cirka iyo Dhulkaba Eebe abuuray wax dhib ah iyo wax wanaag ahna cid aan Eebe ahayn ma awoodo isagaana kaafiya dadka ee isaga uun ha la tala saarto, Nabiga iyo inta raacday waxay qaadi wadada xaqa ah ee toosan, Gaalana waxay u leexatey meel xun cid walbana saas ha ahaato waxaa la ogaan doonaa cidduu halelo cadaab joogta ah oo wax dulleeya. Tirmidi wuxuu wariyay: Waxaa liibaancy ruux lagu hanuuniyey Islaamka, noloshiisuna ahaatey cunno maalmeed kuna qancay. Az-Zumar (36-40).

41. Annagaa kugu soodajinay Kitaabka (Quraanka) Dadka dartiis si dhab ah, ruuxii hanuunana wuxuu anfici naftiisa,

إِنَّا أَنْزَلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ لِلنَّاسِ بِالْحَقِّ فَمَنِ
أَهْتَدَىٰ فَلِنَفْسِهِ. وَمَنْ ضَلَّ فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيْهِ

kii dhumana wuxuu dhibi naftiisa, adiguna Nabiyow kama tihid wakiil.

وَمَا أَنْتَ عَلَيْهِمْ بِوَكِيلٍ ﴿٤٢﴾

42. Eebaa oofsada nafta markay dhiman iyo tii aan dhimanin ee hurudday, wuxuuna hayn tuu geerida ku xukummay wuxuuna siideyn tii kale tan iyo muddo magacaaban, arrintaasna aayaad (Calaamooyin) yaa ugu sugan ciddii fikireysa.

اللَّهُ يَتَوَفَّى الْأَنْفُسَ حِينَ مَوْتِهَا وَالَّتِي لَمْ تَمُتْ فِي مَنَامِهَا فَيُمْسِكُ الَّتِي قَضَىٰ عَلَيْهَا الْمَوْتَ وَيُرْسِلُ الْأُخْرَىٰ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَعْتَبِرُونَ ﴿٤٣﴾

43. Mise waxay ka yeesheen Eebe wax ka soohadhay shafeecayaal, waxaad dhahdaa (oo ma kayelanyesaan) xaataa haddayna wax hananayn waxna kaysayn.

أَمْ اتَّخَذُوا مِن دُونِ اللَّهِ شُفَعَاءَ قُلْ أُولَٰئِكَ نَأْتُونَ لَأَيِّمَلِكُوتَ سَبِيحًا وَلَا يَعْقِلُونَ ﴿٤٤﴾

44. Waxaad dhahdaa Eebaa iska leh shafeeco oo dhan, waxaana u sugnaaday xukunka Cirka iyo Dhulka xaggiisaana leydiiin celin.

قُلْ لِلَّهِ الشَّفَعَةُ جَمِيعًا لَهُ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٤٥﴾

45. Marka la xuso Eebe kaliya waxaa diidda qalbiyada kuwaan rumeynin aakhiro markii la xuso waxa Eebe ka soo hadhayna markaasay bishaareystaan farxaan.

وَإِذَا دُكِرَ لِلَّهِ وَحْدَهُ اشْتَارَتْ قُلُوبُ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ وَإِذَا دُكِرَ الَّذِينَ مِن دُونِهِ إِذَا هُمْ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿٤٦﴾

Quraanka Eebaa xaq ku soo dajiyey si loogu dhaqmo, xagga rumeynta ku dhaqanka, iskuxukunka iyo raaciddiisa si dhab ah, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) cidna kuma qasbo xaqa ee wuxuu u caddeeyay dhabta, cidii markaas dhunta ama hanuunta waa isaga iyo dantiis, Nabiguna wakiil kama aha, awoodana Eebana iska leh nafta dadkana waa midka midna dili markuu doono midna fasixi sida marka la hurdo waana arrin ciddii caqli leh ay ku waano qaadato, tan kale shafeecada Eebaa iska leh illeen isagaa xukuma Cirka iyo Dhulkaba leh cid uusan fasixinna shafeeco, ee waa in isaga la weydiistaa si dhab ahna loo caabudo mana aha in marka Eebe kaliya la xuso la diido marka waxyaalo kale lala xusana la farxo sida Gaaladii Xusid Eebaa mudan. Az-Zumar (41-45).

46. Waxaad dhahdaa Nabiyow Eebow adaa abuuray Cirka iyo dhulka ogna waxa maqan iyo waxa jooga, adaase kala bixin addoomadaada dhaxdooda waxay isku Khilaafsan yihiin.

قُلِ اللَّهُمَّ فَاطِرَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ عَلِيمَ الْعَيْبِ وَالشَّهَادَةِ أَنْتَ تَحْكُمُ بَيْنَ عِبَادِكَ فِي مَا كَانُوا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٤٧﴾

47. Hadday kuwii dulmiga falay waxa dhulka ku sugan dhamaantii iyo wax la mid ah leeyihiin way iskaga furan

وَأُولَٰئِكَ الَّذِينَ ظَلَمُوا مَا فِي الْأَرْضِ جَمِيعًا وَمِثْلَهُ مَعَهُ لَافْتَدَىٰ بِهِ مِنْ سُوءِ الْعَذَابِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ

lahaayeen Cadaabka Maalina Qiyaa-maha, waxaana uga muuqday xagga Eebe Waxayn maleeysanaynin.

وَبَدَّ اللَّهُ مِنَ اللَّهِ مَا لَمْ يَكُونُوا يَحْتَسِبُونَ ﴿١٧﴾

48. Waxaana u muuqday xumaantay kasbadeen, waxaana ku dhacay waxay ku jees jeesi jireen.

وَبَدَّ اللَّهُ سَيِّئَاتِ مَا كَسَبُوا وَحَاقَ بِهِمْ مَا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿١٨﴾

49. Markuu dhib taabto dadku wuu na baryayaa, markaanse siino Nicmo wuxuu dhahaa waxa la i siiyey waan mutaa, saa ma aha ee waannu imtixaa-mi mase oga badankood.

فَإِذَا مَسَّ الْإِنْسَانَ ضُرٌّ دَعَانَاهُ إِذَا حَرَلْتَهُ نِعْمَةً مِمَّا قَالِ إِنَّمَا أَوْتَيْنَاهُ عَلَىٰ عِلْمٍ بَلْ هِيَ فِتْنَةٌ وَلَكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٩﴾

50. Waxaa saas yidhi kuwii ka horeeyey waxna uma tarin waxay kasbadeen.

فَدَقَّ آلَهَا الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَمَا أَغْنَىٰ عَنْهُمْ مَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿٢٠﴾

51. Waxaana ku dhacay xumaantay kasbadeen, kuwii dulmifalay oo ka mid ahaa kuwaas waxaa ku dhici xumaantey kasbadeen, namana daalliyaan.

فَأَصَابَهُمْ سَيِّئَاتُ مَا كَسَبُوا وَالَّذِينَ ظَلَمُوا مِنْ هَٰؤُلَاءِ سَيُصِيبُهُمْ سَيِّئَاتُ مَا كَسَبُوا وَمَا لَهُمْ بِمُعْجِزِينَ ﴿٢١﴾

52. Miyeyna ogayn inuu Eebe u waasi-ciyo Rizqiga cidduu doono kuna cidhiidhyo (ciduu doono) arrintaasna waxaa ugu sugan aayad ciddii wax rumeyn.

أَوْ لَوْ يَعْلَمُونَ أَنَّ اللَّهَ يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَنْ يَشَاءُ وَيَقْدِرُ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٢٢﴾

Eebaa wax kasta aheysiiyey awoodana leh, kala bixin Dadka Qiyaamada, maalintaas oo Gaaladu isku furan lahaayeen wax kasta haddii la siiyo, waxaana ku dhici waxayna maleeysanayn iyadoo lagu abaalmarin kibirkoodii iyo jees jees koodii mana haboona in marka dhib kugu dhacana aad Eebe baridid, markuu khayr ku siiyana aad dhahdaa waan mutaa, sidii gaaladii hore oon waxba utarin waxay kasbanayeen waxaana dhab ah in cidwalba la abaal marin ama ha horeeyo ama ha dambeeyee, Eebana nolasha waasiciya ama ku cidhiidhya xigmad darteed, si ciddii xaqa rumeysay ugu waano qaadata, Qurdubi wuxuu yidhi: Waxaa loo xusay kuwa xaqa rumeeyey waxay ogyihiin inuu waasiciinta Rizqiga ay tahay imtixaan lagaan yaabo cidhiidhintiisu inay wayneyn tahay. Az-Zumar (46-52).

53. Waxaad dhahdaa Nabiyow addoomadayda ku xad gudbay Naftoodow ha ka quusanina naxariista Eebe, Eebaa dhaafa danbiyada dhamaantoode, waana dambi dhaafbadane naxariis badane.

* قُلْ يٰعِبَادِيَ الَّذِينَ آمَنُوا عَلَيٰ اَنْفُسِهِمْ لَا تَقْنَطُوا مِنْ رَحْمَةِ اللّٰهِ اِنَّ اللّٰهَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا اِنَّهٗ هُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيْمُ ﴿٢٣﴾

54. U noqda Eebihiih una hogaansama ka hor cadaab idiin ku yimaaddoon laydiinkana gargaarayn.

وَاذِيبُوا اِلَىٰ رَبِّكُمْ وَاَسْأَلُوا اللّٰهَ مِنْ قَبْلِ اَنْ يَّاتِيَكُمْ الْعَذَابُ ثُمَّ لَا تُنصَرُونَ ﴿٢٤﴾

55. Raaca kan wanaagsan ee laydiinka soo dajiyey Eebe xaggiisa, ka hor cadaab idinku yimaadda kado, idinkoon oqayn.

وَأَتَّبِعُوا أَحْسَنَ مَا أُنزِلَ إِلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَكُمُ الْعَذَابُ بِغَتَّةٍ وَأَنْتُمْ لَا تَشْعُرُونَ ﴿٥٥﴾

56. Ama odhan nafu shaleyte waxaan ku gaboofalay cibaadada Eebe waxaan ahaa kuwa jees jeesa.

أَنْ تَقُولَ نَفْسٌ يَحْسَرُنِي عَلَى مَا قَرَّبْتُ فِي حَنْبِ اللَّهِ وَإِنْ كُنْتُ لِمَنِ السَّخِرِينَ ﴿٥٦﴾

57. Ama ayan odhan haddii Eebe ihanuuniyo waxaan noqon lahaa kuwa dhawrsada.

أَوْ تَقُولَ لَوْ أَنَّ اللَّهَ هَدَانِي لَكُنْتُ مِنَ الْمُتَّقِينَ ﴿٥٧﴾

58. Ama ayan odhan markay aragto cadaabka hadday noqosho iisugnaan laheyd waxaan ahaan lahaa kuwa samo fala.

أَوْ تَقُولَ حِينَ تَرَى الْعَذَابَ لَوْ أَنَّ لِي كَرَّةً فَأَكُونَ مِنَ الْمُحْسِنِينَ ﴿٥٨﴾

59. Saas ma ah ee waxaa kuu yimid aayaadhkaygii waadna beenisay waadna iswaynaysay waxaadna ka mid noqotay gaalada.

بَلَىٰ قَدْ جَاءَ نَكَأً إِلَيْنِي فَكَذَّبْتَ بِهَا وَاسْتَكْبَرْتَ وَكُنْتَ مِنَ الْكٰفِرِينَ ﴿٥٩﴾

Dadku way gafayaan had iyo jeer Eebana wuxuu ugu bishaareeyay addoomadiisa Mu'miniinta ah inayna ka qusan naxariistiisa waa dambi dhaafce, loona noqdo Eebe, loona hogaansamo Geeri iyo Qiyaame ka hor. taasoon calaacal iyo catow iyo iceliya aan wax tarayn, maxaa yeelay xaqu waa cadyahay cidii isla waynaata oo xaqa diidana waxay ka mid noqon gaalada xaqdiidayaasha ah, aayadahanna waa yeedhid iyo digniita dadka oo dhan, Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Ruuxii ka quusiya addoomaha Eebe toobadda tan ka dib wuxu diiday Kitaabka Eebe. Az-Zumar (53-59).

60. Maalinta qiyaamana waxaad arkeysaa kuwii ku been abuurtay Eebe korkiisa oo wajiyaadoodu madowyahay, miyayna Jahannamo dhexdeedu ahayn hoyga kuwa is kibriya.

وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ تَرَى الَّذِينَ كَذَبُوعَلَى اللَّهِ وَجُوهُهُمْ مُسْوَدَّةٌ أَلَيْسَ فِي جَهَنَّمَ مَثْوًى لِمُتَكَبِرِينَ ﴿٦٠﴾

61. Wuuna koriyaa Eebe kuwa dhawrsaday liibaantooda darteed, mana taabto xumaanu mana murugoodaan.

وَيَتَّبِعِي اللَّهُ الَّذِينَ أَنْفَقُوا بِمَالِهِمْ لَا يَمَسُّهُمُ السُّوءُ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦١﴾

62. Eebana waa abuuraha wax kaste, waana wax walba wakiilkiisa, «maamulaha».

اللَّهُ خَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ وَكِيلٌ ﴿٦٢﴾

63. Isagaana iska leh xukunka Saamooyinka iyo Dhulkaba, kuwa ka

لَهُمْ مَقَالِيدُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَالَّذِينَ كَفَرُوا

gaaloobay aayaadka Eebana waa kuwa khasaaray.

بِعَايَتِ اللَّهِ أُولَئِكَ هُمُ الْخَاسِرُونَ ﴿٣٦﴾

64. Waxaad dhahdaa ma waxkasoo hadhay Eebaad i faraysaan inaan caabudo jaahiliinyahay.

قُلْ أَغَدِرَ اللَّهُ تَأْمُرُونِي أَعْبُدُ أَيُّهَا الْجَاهِلُونَ ﴿٣٧﴾

65. Waxaa dhab ahaan loogu waxyooday adiga iyo kuwii kaahorreeyeyba Nabiyoow haddaad wax la wadaajisa (Eebe) waxaa buri camalkaaga, waxaadna ka mid noqon kuwa khasaaray.

وَلَقَدْ أَوْحَىٰ إِلَيْكَ وَإِلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكَ لَئِنْ أَشْرَكْتَ لَيَحْبَطَنَّ عَمَلُكَ وَلَتَكُونَنَّ مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٣٨﴾

66. ee Eebe uun caabud noqona kuwa ku mahdiya.

بَلِ اللَّهِ فَأَعْبُدْ وَكُنْ مِنَ الشَّاكِرِينَ ﴿٣٩﴾

67. Mayna waynaynin gaaladii Eebe waynaantiisa dhabta ah, isagoo dhulka dhammaantiis ku jiro qabashada gacantiisa Maalinta qiyaame, Samooyinkuna ku duuban yihiin Yamiintiisa Eebaa ka nasahan kana sarreeya waxay la wadaajiyeen.

وَمَا قَدَرُوا اللَّهَ حَقَّ قَدْرِهِ وَالْأَرْضُ جَمِيعًا قَبْضَتُهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَالسَّمَوَاتُ مَطْوِيَّاتٌ بِيَمِينِهِ سُبْحَانَ اللَّهِ وَتَعَالَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٤٠﴾

Qiyaamadu waa dhab, cidwalbana waxaa laga abaalmarin camalkeeda, waxaana loo qaybsami mid farxa oo bishaaraysta iyo mid naxa oo dulloba, Eebaana xukunka iyo awoodda iska leh maalintaas, mana haboona in lala wadaajiyoo cibaadadiisa cid kale, ciddii wax la wadaajisana camalkeedu wuu buri, xumaana ka sarreeya iyo wax lala wadaajiyaba.

Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Gaaladu ma waynayn Eebe mudnaantiisa, ruxii rumeeya in Eebe wax walba karo wuu wayneeyay waynidiisa dhabta ah, ruuxaan rumeynina ma waynayn. Az-Zumar (60-67).

* Midigtiisa waana mid u qalanta, hana awilin. (dib u eegaha).

68. Waxaa la afuufi suurka (Buunka qiyaame) waxaana suuxi (Dhiman) waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, cidduu Eebe doona mooyee, markaasaa la afuufi mid kale waxaana soo bixi dadkii iyagoo taagan oo sugi (xukunka Eebe).

وَنُفِخَ فِي الصُّورِ فَصَعِقَ مَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَمَنْ فِي الْأَرْضِ إِلَّا مَنْ شَاءَ اللَّهُ ثُمَّ نُفِخَ فِيهِ أُخْرَىٰ فَإِذَا هُمْ قِيَامٌ يَنْظُرُونَ ﴿٤١﴾

69. Wuxuuna la ifi dhulku nuurka Eebihis waxaana la soo dajin (dawayn) Kitaabkii (Camalka) waxaana la keeni Nabiyadii iyo maragii (Malaa'igta), waxaana lagu kala xukumi dhexdooda xaq lamana dulmiyo.

وَأَشْرَقَتِ الْأَرْضُ بِنُورِ رَبِّهَا وَوُضِعَ الْكُتُبُ وَجَاءَتْ بِالسُّعَدَىٰ وَالشُّهَدَاءُ وَوُضِيَ بَيْنَهُم بِالْحَقِّ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٤٢﴾

70. Waxaana loo oofin (dhameyn)

وَوُضِعَتْ كُلُّ نَفْسٍ مَّا عَمِلَتْ وَهُوَ أَعْلَمُ

nafkastaa waxay camalfashay, Eebana waa ogyahay waxay camalfalayaan.

بِمَا يَفْعَلُونَ ﴿٧١﴾

71. Waxaana loo kaxeyn kuwii gaaloo-bay xagga jahannamo iyagoo kooxo ah markay yimaadaan Naartana waxaa la furaa Albaabadeeda waxayna udha-haan adeegaheedu miyeyna idiin imaanin Rasuullo idinka mid ah oo idinku akhriya aayaadka Eebihiin idiinkana diga lakulanka Maalintiinan waxayna dhihi way nooyimaadeen waxaase ku rumoobay Gaalada kalimadii Cadaab-ka (ee Eebe).

وَسِيقَ الَّذِينَ كَفَرُوا إِلَىٰ جَهَنَّمَ زُمَرًا ۖ حَتَّىٰ إِذَا جَاءَهُمْ هَاهُنَا صُوتُ الْأَبْوَابِ ۖ وَقَالَ لَهُمْ خَزَنَتُهَا أَلَمْ يَأْتِكُمْ رُسُلٌ مِّنكُمْ يَتْلُونَ عَلَيْكُمْ آيَاتِ رَبِّكُمْ وَيُنذِرُونَكُمْ لِقَاءَ يَوْمِكُمْ هَٰذَا ۚ قَالُوا بَلَىٰ ۗ وَلَٰكِن حَقَّتْ كَلِمَةُ الْعَذَابِ عَلَىٰ الْكَافِرِينَ ﴿٧١﴾

72. Waxaana lagu dhihi gala albaabada Jahannamo idinkoo ku waari dhexdeeda iyadaana u xun meelay ku hoydaan kuwa is kibriya.

قِيلَ ادْخُلُوا أَبْوَابَ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا ۖ فِيمَسُّ مَثْوَىٰ الْمُتَكَبِّرِينَ ﴿٧٢﴾

Sidoo kale qiyaamadu waa xaq sugan waxaana Dadka ku dhici qaylo ay cidkasta la suuxi lana dhiman intuu Eebe doono mooyee, kadibna la afuufi Suurka Qiyaame, dadkuna soo bixi Eebahoodna hor istaagi, shulkuna la ifi nuurka Eebe, lana keeni Kitaabkii camalka, Nabiyadii iyo markhaatiyadii, caddaaladna Eebe ku kala xugmin isagoon cidna dulmiyeyn, Nafwalbana waxaa lagu abaal marin waxay camal fashay isagoo Eebe dhab u ogyahay, Gaaladana waxaa loo kaxayn xagga naarta jahannamo iyagoo kooxo ah, Malaa'igtuna ay warsan in Rasuullo loo soo diray ku akhrida xaqa ayana digta qiyaamada, way qiran gaaladii arrintaas waxaase u waajibtay ciqaab daran, waxaana la fari inay galaan Jahannamo oo markaas la furay Albaabadeeda wayna ku waari, waana hoyga kuwa iskibriya. Abuu hureeyre waxaa laga wariyey in Nabigu yidhi: Labada afufo waxaa u dhaxeyn afartan, Abuu hureyre wuxuu yidhi: ma ogi afartankaas. Az-Zumar (68-72).

73. Waxaana loo wadi kuwii ka dhawrsaday Eebahood xagga jannada iyagoo kooxo ah markay yimaadaan jannadana iyadoo la furay albaabadeeda (marhore) waxay ku dhihi adeegaheedu nabadgalyo korkiina ha ahaato, waad wanaagsanaateen (liibaanteen) ee gala janada idinkoo ku waari.

وَسِيقَ الَّذِينَ اتَّقَوْا رَبَّهُمْ إِلَىٰ الْجَنَّةِ زُمَرًا ۖ حَتَّىٰ إِذَا جَاءَهُمْ هَاهُنَا وَفُيْحَتْ أَبْوَابُهُمْ وَقَالَ لَهُمْ خَزَنَتُهَا سَلِّمُوا عَلَيْكُمْ رَبِّكُمْ ۖ قَدْ دَخَلْتُمْ خَالِدِينَ ﴿٧٣﴾

74. Waxayna dhihi mahad waxaa iska leh Eebaha noo rumeeyey yaboohiisa, nana dhaxalsiiyay dhulka (janada) waxaana ka dagnaa janada meeshaan doonno waxaana wanaag badan ajriga kuwii camal falay.

وَقَالُوا الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي صَدَقَنَا وَعْدَهُ ۖ وَأَوْرَثَنَا الْأَرْضَ نَتَبَوَّأُ مِنَ الْجَنَّةِ حَيْثُ نَشَاءُ ۖ فَنِعْمَ أَجْرُ الْعَامِلِينَ ﴿٧٤﴾

75. Waxaad arkaysaa malaa'igtoo ku wareegsan gaararka carshiga kuna tasbiixsan mahadda Eebahood, waana la kala xukumi dadkii dhexdooda si xaq ah, waxaana la dhihi mahad Eebaa iska leh ee ah Eebaha caalamka.

وَتَرَى الْمَلَائِكَةَ حَافِينَ مِنْ حَوْلِ الْعَرْشِ
يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ وَقُضِيَ بَيْنَهُمُ بِالْحَقِّ وَقِيلَ
الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٧٥﴾

Mu'miniinta waxaa loo wadi xagga janada iyagoo wafdi ah, iyadoo loo sii furi malaa'igtuna soo dhaweyn oo salaami kuna dhihi waad liibaanteene janadana gala idinkoo ku waari, waxayna ku mahdiyaan Eebahood, illeen wuxuu galiyey janno ay ka dagi meeshay rabaane, malaa'igtuna waxay ku meeraysan gaararka Carshiga, xaalkuna wuxuu ku dhamaan in dadka caddaalad lagu kala xukumo iyo in awood iyo mahadi usugnaatay Eebaha caalamka. Maxaa ka wayn maalintaas, maxaase ka farax iyo liibaanbadan Mu'miniinta kana khasaare iyo qoomamo badan gaalada, kana awood iyo caddaalad badan Eebaha xakamka caadilka ah.

Mucaad waxaa laga wariyey in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee) yidhi: Furaha jannadu waa Eebe mooyee Ilaah kale majiro (Ashahaadada). Waxaa wariyey Imam Axmed. Az-Zumar (73-75).



Suurat Ghaafir

سُورَةُ غَافِرٍ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (waxay ku tusin mucjisada quraanka sidii soo hor martay).

حَمْدٌ

2. Soo dajinta Kitaabka (quraanka) waxay ka ahaatay Eebaha adkaada ee wax walba og.

تَنْزِيلُ الْكِتَابِ مِنَ اللَّهِ الْعَزِيزِ الْعَلِيمِ ﴿١﴾

3. Ee dhaafa danbiga aqbalana toobad-da, ayna darantahay ciqaabtiisu, ee nicmada badanleh, Eebe aan ilaahay ahayna ma jiro, xaggiisaana loo noqon.

غَافِرُ الذَّنْبِ وَقَابِلُ التَّوْبِ شَدِيدُ الْعِقَابِ ذِي الطَّوْلِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ إِلَهٌ مُّخْتَصِرٌ ﴿٢﴾

4. Kuma doodo aayaadka Eebe kuwa gaaloobey mooyee, ee yeyna kugu dhagrin gagadoonkooda adduunka.

مَا يَجِدُ فِيءِ آيَاتِ اللَّهِ إِلَّا الَّذِينَ كَفَرُوا فَلَا تَعْرَظْكَ تَقَالِبُهُمْ فِي الْإِلَادِ ﴿٣﴾

5. waxaa beeniyay hortood qoomkii (Nabi) Nuux iyo xisbiyadii ka dam-beeyey, waxayna doontay ummad kastaa rasuulkoodii inay qabato (oy dilaan) waxayna ku doodeen baadil (xumaan) inay xaqa ku tirtiraan, markaasaan qabtay ee waa sidee ciqaabteydii.

كَذَّبَتْ قَبْلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ وَالْأَحْرَابُ مِنْ بَعْدِهِمْ وَهَمَّتْ كُلُّ أُمَّةٍ بِرَسُولِهِمْ لِيَأْخُذُوهُ وَيَحْدِلُوا إِلَّا بِالْبَطْلِ يُدْجِسُوا بِهِ الْحَقَّ فَأَخَذْتَهُمْ فَكَيْفَ كَانَ عِقَابِ ﴿٤﴾

6. Saasayna ugu sugnaatay kalimadii Eeb «ciqaabtiisu» kuwii gaaloobay, waana inay yihiin naarta ehelkeeda.

وَكَذَلِكَ حَقَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ عَلَى الَّذِينَ كَفَرُوا أَنَّهُمْ أَصْحَابُ النَّارِ ﴿٥﴾

Quraanka Eebaa soo dajiyey, waana adkaade wax walba oge, dambi dhaafe, toobad aqbale, ciqaab darane, iyo khayrbadane xagiisa loo noqon, quraanka oo la beeniyana oo si xun loogu doodo waa caadada gaalada, adduunka oolagu hormarana kuma tusiso jeclaansho Eebe, ee ha ku kadsoomin socsodoka gaalada (xaqdiidayaasha) Gaalana waa isku fikrad laga soo bilaabo Nabi Nuux, waxayna dooni inay dilaan Nabiyada iyo dadka wanaagga fari, xaqana xumaan ku qariyaan, waxaase daran ciqaabta Eebe uu ku abaal marin naar ruuxii xaqa ku qariya xumaan, Eebe iyo Rasuulkiisuna waa ka bari. Ghaafir (1-6).

7. Kuwa (Malaa'igta) xambaarsan cars-

الَّذِينَ يَحْمِلُونَ الْعَرْشَ وَمَنْ حَوْلَهُ. يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ

higa iyo kuwa gaararkiisa ah waxay ku tasbiixsan kuna Mahadin Eebhood wayna rumeysanyihiin, waxayna u dambi dhaaf warsan kuwa rumeeyey iyagoo dhihi Eebahanow waxaad ugu waasac noqon wax kasta naxariis iyo ogaanshee u dambidhaaf kuwa toobad-keena ee raaca jidkaaga kana dhawr cadaabka jaxiimo.

8. Eebow gali kuwaas jannada cadni ee ah taad u yaboohday iyaga iyo ruuxii suubanaada oo ah Aabayaalkood, Haweenkooda iyo Caruurtooda, adigaa ah adkaade falsane.

9. Kana dhawr xumaanta (Ciqaabta) ruuxaad ka dhawrto xumaanta maalin-taas waad u naxariisatay taasina waa liibaanta wayn.

Iimaanku waa wax wayn oo qiimobadan maxaayeelay Malaa'igta Eebe ee xambaarsan Carshiga iyo kuwa gaararjooga waxay uducaayn una dambidhaaf warsan Mu'miniinta jidka Eebe ku toosan iyo ehelkooda, iyagoo u warsan Eebe inuu janno galiyo ciqaabna ka dhawro, taasna waxay ku tusin qaraabo nimada ugu fiican inay tahay tan iimaanka ee isku xidhay Cirka iyo Dhulka, wuxuuna ka sarreyaa wax kastoo wax isku xidha, saasaana looga baahanyahay Mu'miniinta inay isu jeclaadaan isuguna duceedyaan. Waxaana sugnaatay haduu Mulim uduceeyo walaalkiisa muslimka ah isagoo ka maqan Malaa'igtu waxay dhahdaa aamiin adna waxaa kuu sugnaatay wax la mid ah. Waxaa wariyey Muslim. Ghaafir (7-9).

10. Kuwa gaaloobay waxaa loogu dhawaaqaa (qiyaamada) cadhada Eebaa ka wayn cadhadaad naftiina ucad-hootaan, maxaayeelay waxaa laydiinku yeedhi Jiray Iimaanka markaasad gaaloobayseen.

11. Waxay dhihi Eebow waxaad na dishay laba jeer waxaadna na noolaysay laba jeer waana qiranay dambiganagii ee ma suuroowdaa jid naartoa looga baxo.

12. Arrintaas waxaa ugu wacan in marka loo yeedho Eebe kaliya aad gaaloowdaan, haddii wax lala wadaa-

رَبِّهِمْ وَيُقِيمُونَ بِهِ وَيَسْتَعْفِرُونَ لِلَّذِينَ آمَنُوا
رَبَّنَا وَسِعْتَ كُلَّ شَيْءٍ رَّحْمَةً وَعِلْمًا فَاغْفِرْ
لِلَّذِينَ تَابُوا وَاتَّبَعُوا سَبِيلَكَ وَقِهِمْ عَذَابَ
الْجَحِيمِ ﴿٧﴾

رَبَّنَا وَأَدْخِلْهُمْ جَنَّاتٍ عَدْنٍ الَّتِي وَعَدْتَهُمْ
وَمَنْ صَلَحَ مِنْ آبَائِهِمْ وَأَزْوَاجِهِمْ
وَدُرِّبَتِهِمْ إِنَّكَ أَنْتَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٨﴾

وَقِهِمُ السَّيِّئَاتِ وَمَنْ تَقِ السَّيِّئَاتِ يَوْمَئِذٍ
فَقَدْ رَجِمْتَهُ، وَذَلِكَ هُوَ الْقَوْمُ الْعَظِيمُ ﴿٩﴾

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا يُنَادُونَ لَمَقْتُ اللَّهِ أَكْبَرُ مِنْ
مَقْتِكُمْ أَنْفُسَكُمْ إِنْ دُعِيتُمْ إِلَى الْإِيمَانِ
فَتَكْفُرُونَ ﴿١٠﴾

قَالُوا رَبَّنَا آمَنَّا أَلَمْ نَكُنْ مِنْكُمْ وَأَحْيَيْتَنَا أَتَنْتَنِينَ
فَاغْفِرْ فَنَادُوا لَوْ بَدَأْنَا فَمَا نَحْمِلُ إِلَّا خُسْرًا مِنْ
سَبِيلِ ﴿١١﴾

ذَلِكُمْ بِأَنَّهُ إِذَا دُعِيَ اللَّهُ وَرَجِدَهُ
كَفَرْتُمْ إِنْ يَسْرُرْ بِهِ لَوْ مُسْرًا فَأَلْمَعْتُمْ اللَّهَ

jiyana aad rumeysaan xukunka dha-
maantiisna Eebaa iska leh ee sarreeya
waynna.

الْعَرْشِ الْكَبِيرِ ﴿١٢﴾

13. Eebe waa kan idin tusiya aayaad-
kiisa idiinkana soodajiya Samada Rizqi
(Roob) mana xusuusto ruux Eebe uno-
qon mooyee.

هُوَ الَّذِي يُرِيكُمْ آيَاتِهِ وَيُنَزِّل لَكُمْ مِنَ السَّمَاءِ
رِزْقًا وَمَا يَتَذَكَّرُ إِلَّا مَنْ يُنِيبُ ﴿١٣﴾

14. Ee bari (Caabud) Eebe adoo ukali
yeeli cibaadada haba naceen gaaladuye.

فَادْعُوا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ وَلَوْ كَرِهَ
الْكَافِرُونَ ﴿١٤﴾

Cadhada Eebe iyo ciqaabtiisa yaa ka wayn kana culus ucadhoonsho naf markay meelxun kuu horseedo xaqana kaa leexiso, calaacaliyo catoowna wax mataro Qiyaamada iyo dambi la qirto midna, marhadaad aduunkii ku dhunto.

mana haboona xaqna ma aha in marka Eebe kaliya la xuso la gaaloobo xaqana la diido'marka wax kale lala caabudana la rumeeyo, arintaas xukunkeedana Eebaha wayn baa maamuli, ee ah kan tusiya dadka aayaadhiisa'cirkaa Roob uga keena, xaqna aytahay in loo toobadkeeno lana caabudo isagoo loo kali yeeli Diinta iyo cibaadada, haba naceen oo diideen gaaladuye.

Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu yidhi: Barya Eebe sareeye idinkoo yaqiinsan ijaabo, ogaadana in Eebe sareeye uusan ajiibayn duco qalbi halmaansan oo shuqloon, waxaawariyay Ibnu Abii xaatim. Ghaafir (10-14).

15. Eebe waa kan ay sarrayso daraja-
diisu (waxna koryeela) carshigana iska
leh, kuna soo dajiya waxyigiisa (iyo
jibriil) oo ah amarkiisa cidduu doono
oo adoomadiisa ah, si uu uga digo
maalinta kulanka (Qiyaamada).

رَفِيعِ الدَّرَجَاتِ ذُو الْعَرْشِ يُلْقِي الرُّوحَ مِنْ
أَمْرِهِ عَلَى مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ لِيُنْذِرَ يَوْمَ
الْقِيَامَةِ ﴿١٥﴾

16. Maalintay usoo muuqan (usoo bixi)
Eebe waxba kama qarsoona korkiisa,
wuxuuna dhihi Eebe yaa xukunka iska
leh maanta, markaasuu dhihi Eebaha
kalida ah ee awooda badan.

يَوْمَ هُمْ كَبِيرُونَ لَا يَخْفَى عَلَى اللَّهِ مِنْهُمْ شَيْءٌ لَمَنْ
الْمَلِكُ الْيَوْمَ لِلَّهِ الْوَجْدُ الْقَهَّارِ ﴿١٦﴾

17. Maanta (Qiyaamada) waxaa laga
abaalmarin nafkastaa waxay kasbatay,
dulmina majiro Maanta, Eebana wey
dag dag badantahay xisaabtiisu.

الْيَوْمَ تُجْزَى كُلُّ نَفْسٍ بِمَا كَسَبَتْ لَا ظُلْمَ
الْيَوْمَ إِنَّ اللَّهَ سَرِيعُ الْحِسَابِ ﴿١٧﴾

18. Uga dig Nabiyow dadka Maalinta
dhaw (Qiyaamada) markuu wadnuhu
imaan dhuunta (Cabsi darteed) iyagoo
naxsan daalimiinna uma sugnaan so-
keeye iyo mid u shafeecoo la maqlo.

وَأَنْذِرْهُمْ يَوْمَ الْآزِفَةِ إِذِ الْقُلُوبُ لَدَى الْحَنَاجِرِ
كُظْمٍ مِمَّا لَالِظُوا بِهَا مِنْ حَمِيمٍ وَلَا سَفِيرٍ
يُظَاعُ ﴿١٨﴾

19. Eebe waa ogyahay khayaanada indhaha iyo waxay qarín laabtu.

يَعْلَمُ خَائِبَاتِ الْعَيْنِ وَمَا خْفَى الصُّدُورِ ﴿١٩﴾

20. Eebe wuxuu xukumaa xaqa, waxay caabudina oo Eebe ka sokeeya waxba ma xukumaan, Eebana waa maqle arka ah.

وَاللَّهُ يَقْضِي بِالْحَقِّ وَالَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ لَا يَقْضُونَ بِشَيْءٍ إِنَّ اللَّهَ هُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ ﴿٢٠﴾

Eebaa sharaf leh'cidduu doonana sharrifa, waxyigiisana kusoo dajiyay addoomaduu doortay ee Nabiyada ahaa, si ay dadka ugu digaan.

xukunka adduunka iyo aakhiraba Eebaa iska leh wax ka qarsoonna majiro Cidna ma dulmiyo, xisaabtiisuna waa darantahay, dadkana waxaa looga digayaa maalinta qiyaame ee dhaw, illeen wixii imaanba waa dhawyahaye, waana maalin cabsi badan wadnuhna dhuunta imaan, cidna wax isu tarayn, Eebana wax walba daalacan'xaqana xukumi, waxa la caabudo ee ka soo hadhayna ayan waxba qabaneyn.

Xadiith Alqudsi waxaa ku sugnaaday in Eebe yidhi: addoomadaydoow waan kareebay dulmiga naftayda waxaana ka yeelay dhexdiinna mid reeban ee hays dulmiyina... waxaaa wariyay Muslim. Ghaafir (15-20).

21. Miyayna ku soconin Dhulka ooyan fiirinin siday noqotay cidhibtii kuwi ka horreeyey (Gaaladan) waxay ahaayeen kuwa ka xoogbadan kana camiraadbadan dhulka, markaasuu qabtay Eebe danbigooda dartiis umana sugnaan waxa Eebe ka soo hadhay wax daafaca.

﴿أَوَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الَّذِينَ كَانُوا مِنْ قَبْلِهِمْ كَانُوا أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَأَنَارُوا فِي الْأَرْضِ فَاخَذَهُمُ اللَّهُ بِذُنُوبِهِمْ وَمَا كَانَ لَهُمْ مِنَ اللَّهِ مِنْ وَاقٍ ﴿٢١﴾﴾

22. Waxaana saas ugu wacan inay ahayd inay ula imaan Jirtay Rasuuldoodii xujooyin, oy ka gaaloobeen markaas Eebe qabtay maxaa yeelay waa xoogbadane ay darantahay ciqaa-tiisu.

ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَانَتْ تَأْتِيهِمْ رُسُلُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَكَفَرُوا فَآخَذَهُمُ اللَّهُ إِنَّهُ قَوِيٌّ سَدِيدٌ الْعِقَابِ ﴿٢٢﴾

23. Dhab ahaan yaan (Nabi) Muuse ugu dirray isagoo wata aayaadkanaga iyo xujo cad.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ بِآيَاتِنَا وَسُلْطٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٢٣﴾

24. Xagga Fircoon, Haamaan iyo Qaarun waxayna dheheen waa sixirroow beenaala ah.

إِلَىٰ قُرْعَوٰتٍ وَهَمْدٰنَ وَقَدْرُونَ فَقَالُوا سِحْرٌ كَذٰبٌ ﴿٢٤﴾

25. Markuu ugala yimid xaqa agtanada waxay dheheen dila Wiilasha kuwa rumeeyey, daayana Haweenka (Gabhaha) dhagarta gaaladuna ma aha waxaan khasaare ahayn.

فَلَمَّا جَاءَهُمْ بِالْحَقِّ مِنْ عِنْدِنَا قَالُوا اقْتُلُوا أَبْنَاءَ الَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُ. وَأَسْتَحْيُوا نِسَاءَهُمْ وَمَا كَيْدُ الْكٰفِرِينَ إِلَّا فِي ضَلٰلٍ ﴿٢٥﴾

26. Wuxuu yidhi Fircoon, i daaya aan dilo Muusee hana uyeedho Eebihiisa, waxaan ka cabsan inuu idinka badalo Diinta ama uu ka muujiyo dhulka fasaad.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ ذَرُونِي أَقْتُلْ مُوسَى وَلْيَدْعُ رَبَّهُ إِنِّي أَخَافُ أَنْ يُبَدِّلَ دِينَكُمْ أَوْ أَنْ يُظْهِرَ فِي الْأَرْضِ الْفَسَادَ ﴿٦٦﴾

27. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muusee waaxaan ka magangalay Eebahay iyo Eebihiin mid kasta oo is kibriya (isla wayn) oon rumayn Maalinta xisaabta qiyaamada.

وَقَالَ مُوسَى إِنِّي عُذْتُ بِرَبِّي وَرَبِّكُمْ مِنْ كُلِّ مُتَكَبِّرٍ لَا يُؤْمِنُ يَوْمَ الْحِسَابِ ﴿٦٧﴾

Dhulka waa in lagu waano qaato lana eego dadkii horee daganaa iyo sida Eebe u halaagay iyagoo xoogbadnaa, markey beeniyeen Rasuuladoodii Eebana si daran ayuu u ciqaabay, tan kale qisada Nabi Muuse wax badan yey quraanka ku soo aroortay, halkanna Fircoon, Haamaan iyo Qaaruu waxay beeniyeen xaqii, waxayna is faren in lalaayo wiilasha kuwa rumeeyey Muuse, Haweenkana daayaan, waxay dhagraan gaalana waa uun khasaare, tan kale Fircoon wuxuu codsaday in la daayo si uu u dilo Muuse isaga oo sheegi inuu badali diinta, dhulkana fasaadin, taasina waa caadada xumaan iyo shar Ka taliyayaasha inay wanaagga iyo dadkiisa ceebeeyaan, lana dagaalamaan.

Nabi Muusana wuxuu ka magan galay Eebe kibir badane dhamaantiis oo beeniyeey xisaabinta «qiyaame». Ghaafir (21-27).

28. Wuxuu yidhi nin Mu'min ah oo ka mid ah dadka Fircoon oo qarinaayay Iimaankiisa, ma waxaad udilaysaan in uu yidhi Eebahay waa Alle, isagoo idiinkala yimid xujooyin xagga Eebihiin hadduu beenaale yahayna isagay dhibi beentiisu, hadduu runle yahayna waxaa idin ku dhici wuxu idiin ku yaboohay qaarkiis, Eebana ma hanuuniyo danbi badane been badan.

وَقَالَ رَجُلٌ مُؤْمِنٌ مِنْ آلِ فِرْعَوْنَ يَكْتُمُ إِيمَانَهُ أَتَقْتُلُونَ رَجُلًا أَنْ يَقُولَ رَبِّيَ اللَّهُ وَقَدْ جَاءَكُمْ بِالْبَيِّنَاتِ مِنْ رَبِّكُمْ وَإِنْ يَكْفُرْ بِمَا فَعَلْتُمْ كُذِّبَتْ أَلْسِنَتُهُ لِيُكْفِرَ بِاللَّهِ الَّذِي يَعْبُدُكُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي مَنْ هُوَ مُسْرِفٌ كَذَّابٌ ﴿٦٨﴾

29. Qoomkayoow idinkaa iska leh xukunka maanta una adag dhulka, yaase nooga gargaari cadaabka Eebe hadduu inoo yimaado, fircoon wuxuu yidhi idin kula talin maayo waxaan ahayn ra'yigayga (waxa ii muuqda) idinkumana hanuuniyo waxaan ahayn waddada xaqa ah.

يَقُولُونَ لَكُمْ الْمَلَائِكَةُ آتِيَةٌ ظَاهِرِينَ فِي الْأَرْضِ فَمَنْ يَبْصُرْنَا مِنْ بَأْسِ اللَّهِ إِنْ جَاءَنَا قَالَ فِرْعَوْنُ مَا أُرِيكُمْ إِلَّا مَا أَرَى وَمَا أَهْدِيكُمْ إِلَّا سَبِيلَ الرَّسَادِ ﴿٦٩﴾

30. Wuxuu yidhi kii rumeeyey (Xaqa) qoomkayoow waxaan idiin ka cabsan sidii maalintii xisbiyadii.

وَقَالَ الَّذِينَ آمَنُوا لَوْ كُنَّا نَسْمَعُ أَوْ نَعْقِلُ مَا كُنَّا فِي أَصْحَابِ آلِ فِرْعَوْنَ إِذْ يَتْلُو آيَاتِهِ لَعَلَّ بَشَرٌ مِمَّنْ هُمْ أَتَتْهُ آيَاتُهُ يَنْفِرُ بَيْنَ يَدَيْ رَبِّهِمْ ﴿٧٠﴾

31. Sidii Qoomkii Nabi Nuux iyo ree caad iyo thamuud iyo kuwii ka dam-beeyey, Eebana ma aha mid la doona-dulmi addoomada.

مِثْلَ دَابِّ قَوْمِ نُوحٍ وَعَادٍ وَثَمُودَ وَالَّذِينَ مِنْ
بَعْدِهِمْ وَمَا اللَّهُ يُرِيدُ ظُلْمًا لِلْعِبَادِ ﴿٣١﴾

32. Qoomkayow waxaan idkinka cab-san maalinta isu yeedhidda (Qiyaama-da).

وَيَقَوْمٍ إِلَىٰ أَخَافَ عَلَيْكُمْ يَوْمَ التَّنَادِ ﴿٣٢﴾

33. Maalintaad jeedsandoontaan idin-koo carari, idiinna sugnayn wax Eebe idinka ilaaliya, ruux Eebe dhumiyeyna malaha «ma jiro» wax hanuunin.

يَوْمَ تُولُونَ مُدْبِرِينَ مَا لَكُمْ مِنَ اللَّهِ مِنْ عَاصِرٍ وَمَنْ
يُضِلِلِ اللَّهُ فَمَا لَهُ مِنْ هَادٍ ﴿٣٣﴾

Cid fiican oo xumaanta reebta wanaagana farta lama waayo, waxaana ka mid ah Mu'minkaas fircoon ehelkiisa ka mid ahaa, ee qariyay iimaankiisa kuna yidhi nawaxaad dileysaan nin yidhi Eebahay waa alle, oo xujooyin idiinla yimid, hadduu beenaale yahay isagay dhibi, hadduu runle yahayna waxaa idinku dhici wuxuu Sheegi qaarkiis, maantana idinkaa dhulka xukuma oo kamuuqda, haddiise dhib Eebe yimaaddo yaa inaga korin, fircoonse nin xunbuu ahaa wuxuuna ku yidhi qoomkiisii arrini waa taan anigu sheego oon rayiyeeyo waxaan wanaag ahayna idin tusin maayo, laakiin ma dhabaa xumaantuu tusiyay una hogaamiyay miyaan loo halaagin sidii kuwii ka horeeyey taasna waxay ka digi xumaan wada warkiisa. Ghaafir (28-33).

34. Waxaa dhab ahaan idiin kula yimid xujooyin marhore (Nabi) Yuusuf, ka-mana aydaan tagin shaki wuxuu idiin la yimid,markuu dhintayna waxaad dhah-deen ma soobixinaayo Eebe gadaashiis Rasuul, saasuuna udhumiya Eebe Ruux xad gudba oo shaki badan.

وَلَقَدْ جَاءَ كُرَيْسُ مِنْ قَبْلِ يَالَيْسَ
فَمَا زِلْتُمْ فِي شَكِّ مِمَّا جَاءَ كُمْ بِهِ حَتَّىٰ إِذَا
هَلَكَ أَفْتَرْتُمْ لَنْ يَبْعَثَ اللَّهُ مِنْ بَعْدِهِ رَسُولًا
كَذَلِكَ يُضِلُّ اللَّهُ مَنْ هُوَ مُسْرِفٌ مُرْتَابٌ ﴿٣٤﴾

35. Kuwa kudoodaya ayaadkanaga xujo utimid la'aanteed waxaa ku way-naatay cadho Eebe agtiisa iyo kuwa rumeeyay, saasuuna u daabacaa Eebe qalbi kastoo is kibriya oo daalim ah.

الَّذِينَ يُجَادِلُونَ فِي آيَاتِ اللَّهِ يَعْتَدِرُ سُلْطِينَ
أَتَاهُمْ كَرِيمًا مَقْتًا عِنْدَ اللَّهِ وَعِنْدَ الَّذِينَ
ءَامَنُوا كَذَلِكَ يَطْبَعُ اللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ قَلْبٍ
مُتَكَبِّرٍ مَجْتَابٍ ﴿٣٥﴾

36. Wuxuu yidhi fircoon Haamaanoow ii dhis Daar (Sare) si aan ugu gaadho wadooyinka.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ يَا هَذَانِ لَوْ لِي صَرْحًا لَعَلِّي أَبْلُغُ
الْأَسْبَابِ ﴿٣٦﴾

37. Wadooyinka Samooyinka markaas aandaalacdo Ilaaha Muuse anigu waxaan u malayn beenaalee, saasaana loogu qurxiyay fircoon camalkiisa xun loogona leexiyay jidka, dhagarta fir-

أَسْبَبَ السَّمَوَاتِ فَأَطَّلِعَ إِلَىٰ إِلَهِ مُوسَىٰ وَإِنِّي
لَأَظُنُّهُ كَذِبًا وَكَذَلِكَ زُيِّنَ لِفِرْعَوْنَ سُوءُ
عَمَلِهِ وَصُدَّ عَنِ السَّبِيلِ وَمَا كَيْدُ فِرْعَوْنَ

coonna, ma aha waxaan khasaare ahayn.

38. Wuxuu yidhi kii rumeeyay (Xaqa) qoomkayoow i raaca waxaan idinku hanuunin jidka fiicane.

39. Qoomkayoow nolashan adduunyo ee dhaw waa uun raaxo (yar) aakha-raase guri nagaadi ah.

40. Ruuxii camal xun sameeya laguma abaal mariyo wax lamid ah mooyee, Ruuxiise camal fiican fala Lab iyo Dhaddigba isagoo rumaysan kuwaasi waxay gali Jannada, waana lagu arzuqi dhexdeeda xisaab la'aan.

Qisada Nabi Yuusuf waxay ku faahfaahsantahay suuradda magaciisa xambaarsan, tan kale in gadaashiis Nabi lasoo diri ciddii diiday waa cid dhunsan, isla wayne, dulmibadane, Xaqdiide iyo xumaan ku murme dhamaantood Eebe waa u cadhoodaa iyo Mu'minintuba, Xaqna ma arko kaasoo kale, waxaa iyana wax lala yaabo ah doqonimadii fircoon iyo isla waynidiisii intuu ka doonay in loo dhiso Guri dheer oo uu Dadka ku tusiyo inuu Ilaahay daydayi, taasina waa waallidiisii iyo camalkiisii xumaa ee waxbadan Quraanku ka warramay.

masimanyihiin kaas iyo kan jidka fiican Dadka ku toosiyay, ugana digay xummanta adduunyo, iyadoo cidwalba la abaalmarin Rag iyo Haweenba. Ghaafir (34-40).

41. Qoomkayoow maxaa ugu wacan inaan idiinku yeedho korid iddina iigu yeedhaan Naar.

42. Iiguna yeedhaan inaan ka gaaloobo Eebe lana wadaajiyo (Cibaadada) wa-xaanan oqoon ulahayn, aniguna wa-xaan idiin ku yeedhi xagga Eebaha adkaada ee dambidhaafa.

43. Waxaan shaki lahayn in waxaad iigu yeedhaysaan xaggiisa uusan lahayn Nacfi (iyo wax ajiiba) adduun iyo aakhiraba, waxaana laynoo celin xagga Eebe kuwa xadgudbana iyaga uunbaa ah asaxaabta (Ehelka) naarta.

44. Waadna xusuusan doontaan wa-xaan idin kuleeyahay, waxaana u band-higay amarkayga xagga Eebe, illeen

إِلَّا فِي تَبَابٍ ﴿٣٧﴾

وَقَالَ الَّذِينَ ءَامَنُ يَنْقُومُ أَنْتَعُمُونَ أَهْدَكُمُ
سَبِيلَ الرَّشَادِ ﴿٣٨﴾

يَنْقُومُ إِنَّمَا هَذِهِ الْحَيَوةُ الدُّنْيَا مَتَّعُ وَإِنَّ
الْآخِرَةَ هِيَ دَارُ الْقَرَارِ ﴿٣٩﴾

مَنْ عَمِلَ سَيِّئَةً فَلَا يُجْزَى إِلَّا مِثْلَهَا وَمَنْ
عَمِلَ صَالِحًا مِّنْ ذَكَرٍ أَوْ أَنْفَقَ وَهُوَ مُؤْمِنٌ
فَأُولَئِكَ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ يُرْفَعُونَ فِيهَا
بِعَنَابٍ حِسَابٍ ﴿٤٠﴾

* وَيَنْقُومُ مَا لِيَ أَذْعُوكُمْ إِلَى التَّجْوَدِ وَيَدْعُونِي
إِلَى النَّارِ ﴿٤١﴾

تَدْعُونِي لِأَكْفُرُ بِاللَّهِ وَأَشْرِكُ بِهِ مَا لَيْسَ لِي
بِهِ عِلْمٌ وَأَنَا أَدْعُوكُمْ إِلَى الْعَزِيزِ الْعَقْبَرِ ﴿٤٢﴾

لَا جَرَمَ لَنَا إِنَّمَا تَدْعُونِي إِلَىٰ لَيْسَ لَكَ دَعْوَةٌ
الدُّنْيَا وَلَا فِي الْآخِرَةِ وَأَنْ مَّرَدَّنَا إِلَى اللَّهِ
وَأَنَّ الْمُسْرِفِينَ هُمْ أَصْحَابُ النَّارِ ﴿٤٣﴾

فَسَتَذْكُرُونَ مَا أَقُولُ لَكُمْ وَأَهْوَسُ أَمْرِي إِلَى
اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ بَصِيرٌ بِالْعِبَادِ ﴿٤٤﴾

Eebaa arka addoomadee.

45. Markaasaa Eebe ka dhawray Mu'minkaas xumaantay ku dhagreen, waxaana ku dhacay (ku dagay) Fircoon iyo ehelkiisii cadaab xun.

فَوَقَدَهُ اللَّهُ سَيِّئَاتٍ مَّا مَكْرُوهًا وَحَافٍ يُعَالٍ
فِرْعَوْنَ سَوْءَ الْعَذَابِ ﴿٤٥﴾

46. Naarbaana loo bandhigaa aroortii iyo galabtiiba, Maalintay kacayso Saacaduna (Qiyaamada waxaa ladhihi) galiya fircoon iyo dhelkiisa kan ugu daran cadaab.

الَّتَارُ يُعْرَضُونَ عَلَيْهَا عُذْوًا وَعَشِيًّا وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ أَدْخِلُوا آلَ فِرْعَوْنَ أَشَدَّ الْعَذَابِ ﴿٤٦﴾

Ninkaasu Wuxuu u jeediyey Qoomkiisii hadallo iyo waano Qiimo badan, wuxuuna u sheegay inuu wanaag iyo nabadgalyo ugu yeedhi iyana Naar iyo gaalnimoo aan wax khayr iyo naafi ah lahayn iyo caabudid Ilaahyo baas, wuxuuna cadeeyey in xadgudbayaal abaalkoodu yahay Naar, ayna xusuusan doonaan waxa wanaagsan ee uu sheegi amarkiisana uu Eebe u bandhigi isagoo arka addoomadiisa Eebana waa ka nabadgaliyey dhagartii Fircoon isagana waxaa ku dagay xumaantay maleegeen, Qabriga iyo Qiyaamadana waa lagu cadaabi iyaga iyo wixii wadadooda qaada. Ghaafir (41-46).

47. Xusuuso waqtigay ku doodi ehelu Naarku Naarta dhexdeeda ooy ku odhan kuwii (raaciyada ahaa) kuwii (madaxda ahaa) ee isla weynaa idin-kaan idin raacaynay ee wax manooga taraysaan qayb naarta ka mid ah.

وَإِذْ يَتَحَاكَمُونَ فِي التَّارِ فَيَقُولُ الضُّعْفَلِيُّ
لِلَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا إِنَّا كُنَّا لَكُمْ تَبَعًا فاهل
انهم مُعْتَبُونَ عَنَّا نَفِيصِيَّاتٍ التَّارِ ﴿٤٧﴾

48. Waxay dheheen kuwii iskiibriyey dhamaanteen waxaan ku sugan nahay naarta dhexdeeda, Eebana waa kala xukumay addoomadiisa dhexdooda.

قَالَ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا إِنَّا كُنَّا لَكُمْ تَبَعًا فاهل
اللَّهُ فَدَحَكُم بَيْنَ الْعِبَادِ ﴿٤٨﴾

49. Waxayna ku dhaheen kuwa naarta kusugan adeegaha jahannamo noo barya Eebihiin inuu naga fududeeyo maalin cadaabka.

وَقَالَ الَّذِينَ فِي التَّارِ لِحِزْبِ جَهَنَّمَ ادْعُوا
رَبَّكُمْ يُخَفِّفْ عَنَّا يَوْمًا مِنَ الْعَذَابِ ﴿٤٩﴾

50. Waxay dheheen adeegayaashii miyeyna ahayn inay idiinla timid Rasuuladii jujooyin, waxay dhaheen way noola timid, waxayna dhaheen barya idinku marka Eebe, baryada gaaladana ma aha waxaan baadi iyo khasaare ahayn.

قَالُوا أَوْلَمَنَّاكَ أَن تَبِيتَ رَسُولُكُمْ بِالْبَيْتِ
قَالُوا بَلَى قَالُوا فَادْعُوا وَمَا دُعَاؤُ الْكَافِرِينَ
إِلَّا فِي ضَلَالٍ ﴿٥٠﴾

51. Annagaa u gargaari Rasuuladanada

إِنَّا لَنَنْصُرُ رُسُلَنَا وَالَّذِينَ ءَامَنُوا فِي الْحَيَاةِ

iyo kuwa rumeeyey xaqa nolosha ad-
duun iyo maalinta ay kici maragyadu.

الذَّيْبِ وَيَوْمَ يَقُومُ الْأَشْهَادُ ﴿٥١﴾

52. Maalintayna anfacayn daalimiinta
cudur daarkoodu,ayna u sugnaan Na-
clad iyo Guri xun (Naar).

يَوْمَ لَا يَنْفَعُ الظَّالِمِينَ مَعَذَرُهُمْ وَلَهُمُ اللَّعْنَةُ
وَلَهُمْ سُوءُ الدَّارِ ﴿٥٢﴾

Dood iyo muran iyo calaacal ehelunaarna wax mataro, waxayna sheegi aayadani inay murmi madaxdii xumayd iyo shacabkii xumaanta ku raacay, dhamaanna ay naarta gali, wax uga maciini cadaabkana ayna heleyn. Eebana ugargaari Rasuladiisa iyo kuwa xaqa ku raacay. saasdarteed waa in wanaagga laysku raacaa iyo Eebe udhawaanshaha, oonse laysku raacin layskuna taageerin Gaalnimada iyo xumaanta, si aan Qiyaamada loo dullobin. Ghaafir (47-52).

53. Dhab ahaan yaan u siinay Nabi
Muuse hanuun (Nabinimo) una dha-
xalsiinay Bani Israa'iil Kitaabka (Taw-
reed).

وَلَقَدْ آتَيْنَا مُوسَى الْهُدَىٰ وَأَوْرَثْنَا سَبِّحَ
إِسْرَائِيلَ الْكِتَابَ ﴿٥٣﴾

54. Hanuun iyo waano isagoo u ah
kuwa caqliga leh.

هُدَىٰ وَذَكَرْنَا لِأُولِي الْأَلْبَابِ ﴿٥٤﴾

55. Ee samir Nabiyow yabooha Eebe
waa dhabe, dambi dhaafna waydiiso
kuna tasbiixo adoo ku dheehan mahad-
da Eebahaa Galab iyo Aroorba.

فَأَصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ وَعَدَّ اللَّهُ حَقَّ وَاسْتَعْفُفْ لِدُنْيَاكَ
وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ بِالْعَشِيِّ وَالْإِبْكَارِ ﴿٥٥﴾

56. Kuwa ku murmi aayaadka Eebe
xujo la'aan u timid laabtooda ma aha
waxaan kibir ayna gaadhayn ahayn, ee
ka magan gala Eebe isagaa wax maqla
waxna arkee.

إِنَّ الْأَذْيَانَ يُجَدِّدُونَ فِي آيَاتِ اللَّهِ يَغْتَابِرُ
سُلْطَانًا أَتَاهُمْ إِنْ فِي صُدُورِهِمْ إِلَّا
كَيْزٌ مَّا هُمْ بِيَلْبِغِيهِ فَنَسْتَعِذُّ بِاللَّهِ إِنَّهُ
هُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ ﴿٥٦﴾

57. Abuuridda cirka iyo Dhulka yaa
kawayn abuuridda Dadka (sida u muu-
qata) laakiin Dadka badidiis ma oga.

لَخَلْقُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ أَكْبَرُ مِنْ خَلْقِ
النَّاسِ وَالْكَوْكَبِ أَكْبَرُ النَّاسِ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٧﴾

58. Ma eka indhoole iyo arke iyo kuwa
rumeeyey (Xaqa) camalfiicanna falay
iyo xumaanloow, wax yar baadse xu-
suusanaysaan.

وَمَا يَسْتَوِي الْأَعْمَىٰ وَالْبَصِيرُ وَالذَّيْبُ ءَأَمْسُوا
وَعَجِلُوا الصَّالِحِينَ وَلَا الْمَيْسِيُّ ءَقَلِيلًا مَّا
تَتَذَكَّرُونَ ﴿٥٨﴾

59. Saacadda (Qiyaame) way iman
shaki la'aan laakiin Dadka badidiis ma
rumeynayaan.

إِنَّ السَّاعَةَ لَأَيُّمَةٌ لَّازِبَةٌ فِيهَا وَالْكَافِرُ أَكْبَرُ
النَّاسِ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٥٩﴾

Wax badan yaa qisada Nabi Muuse iyo Nabiyada Kalaba lagu soo celceliyey Quraanka, si Nabigu u weheshado una xusuusto sidii loo dhibay Eebana ugu gargaaray, waxaana Eebe u dardaarmay Nabiga inuu siibadiyo cibaadada Eebe iyo ku Xidhnaantiisa, kuwa ku murmi xaqa xuja la'aan waxaa qalbigooda galay isla weyni aan meeljirin, Eebahaase abuuray Cirka iyo Dhulka miyaa ka caajisi soo celintooda iyo wuxuu rabo inuu abuuro, ma sinna ruux hanuunsan iyo mid dhunsan, mana sinna Mu'min camalfalay iyo xumaanloow, mase xusuusan yihiin dadku saacadda Qiyaame, waa dhab inaan Mu'min baarri ah iyo Gaal xun sinnayn laakiin Dadku saas ma garanayaan. Ghaafir (53-59).

60. Wuxuu yidhi Eebebiin i barya aan idiin ajiibee (aqbalee), kuwa iska weyneeya cibaadadayda waxay gali doonnaan naarta jahannamo, iyagoo dulleysan.

وَقَالَ رَبُّكُمْ ادْعُونِي أَسْتَجِبْ لَكُمْ إِنَّ الَّذِينَ يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِي سَيَدْخُلُونَ جَهَنَّمَ دَاخِرِينَ ﴿٥٣﴾

61. Eebe waa kan idiin yeeley habeenka inaad xasiloonaataan dhexdiisa, maa-lintana (Ifid) arag, Eebana waa kan wax ku galladaysta dadka, laakiin dadka badankiisu kuma mahdiyaan.

اللَّهُ الَّذِي جَعَلَ لَكُمْ أَنْتِلَ لِتَسْكُنُوا فِيهِ وَالنَّهَارَ مُبْصِرًا إِنَّ اللَّهَ لَدُو فَضْلٍ عَلَى النَّاسِ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٥٤﴾

62. Kassi waa allihiin, Eebana idiin ah wax walbana abuur, Eebe mooyee mid kale ma jiro ee xagee xaqa laydiinka iili.

ذَٰلِكُمْ اللَّهُ رَبُّكُمْ خَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ لَّا إِلَهَ إِلَّا هُوَ فَأَن تُوْفِكُونَ ﴿٥٥﴾

63. Saas ookale yaa loo iilay kuwii aayaadka Eebe diidi jiray.

كَذَٰلِكَ يُؤَفِّكُ الَّذِينَ كَانُوا يَعَادُونَ ﴿٥٦﴾

64. Eebe waa kan idiinka yeelay Dhulka meel sugnaansho, Cirkana dhismo oo idin sawiray wanaajiyayna Suuraddiina oo idinku Arzaaqay wax wanaagsan kaasi waa Eebihiin waxaana sarreeya oo nasahan Eebaha Caalamka Eebihiisa ah.

اللَّهُ الَّذِي جَعَلَ لَكُمْ الْأَرْضَ قَرَارًا وَالسَّمَاءَ بِنَاءً وَصَوَّرَكُمْ فَأَحْسَنَ صُورَكُمْ وَرَزَقَكُمْ مِنَ الطَّيِّبَاتِ ذَٰلِكُمْ اللَّهُ رَبُّكُمْ فَتَبَارَكَ اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ ﴿٥٧﴾

65. Eebaha nool, Eebe aan isaga ahayna ma jiro ee barya (caabudana) idinkoo u kaliyeeli Diinta, mahadna waxaa iska leh Eebaha Caalamka.

هُوَ الَّذِي لَّا إِلَهَ إِلَّا هُوَ فَادْعُوهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٥٨﴾

Nabigu wuxuu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) baryadu waa cibaado, wuxuuna akhriyey aayaddan. saasdarteed waa in uun Eebe la baryaa lana caabudaa, ciddii iska kibrisana waxay gali iyadoo duleysan Naarta, maxaa yeeley waa kan noogu nicmeeyey habeenka iyo Maalintaba, wax walbana abuuray Dhulkana inooga yeeley wax lagusugnaado Cirkana dhismo, oo ina sawiray Qurxiyayna Suuradeenna, wax wanaagsan oo xalaal ahna inagu arzaaqay, kaasi waa Eebeheen wuxuuna inaga mudanyahay Mahad, Baryo, Cibaado iyo Wayneyn. Ghaafir (60-65).

66. Waxaad dhahdaa Nabiyow waxaa layga reebay inaan caabudo waxaad baryeysaan Eebe ka sokow markay iigayimaadeen xujooyin xagga Eebahay, waxaana lay faray inaan uhogaansamo Eebaha Caalamka.

﴿قُلْ إِنِّي نُهَيْتُ أَنْ أَعْبُدَ الَّذِينَ تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ لَمَّا جَاءَنِي الْبَيِّنَاتُ مِنْ رَبِّي وَأُمِرْتُ أَنْ أُسَلِّمَ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٦٦﴾

67. Eebe waa kan idinka abuuray Carrada, Haddana Dhibic, haddana Calaqo markaas idin soo bixiyey idinkoo ilma ah, haddana aad gaadhaan xooiina, haddana aad noqotaan Odayo waxaase idinka mid ah cid la oofsado (Dhimata) intaas ka hor, iyo inaad gaadhaan waqti magacaaban waxaad udhawdhiin inaad wax kastaan.

﴿هُوَ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ تُرَابٍ ثُمَّ مِنْ نُطْفَةٍ ثُمَّ مِنْ عَلَقَةٍ ثُمَّ يُخْرِكُمْ طِفْلاً ثُمَّ لِمَبْلُغُوا أَشَدَّكُمْ ثُمَّ كُنُوزًا ثُمَّ حُمْرًا وَمِنْكُمْ مَنْ يَتُوفَّى مِنْ قَبْلُ وَتِلْكَ أَعْيُنُ النَّاسِ أَنْ يَسْمَعُوا تَعْقُوبَاتِ ﴿٦٧﴾

68. Eebe waa kan nooleeya waxna dila markuu doono inuu xukumo amarna wuxuu uun dhahaa ahaw wuuna ahaadaa.

﴿هُوَ الَّذِي يُحْيِي وَيُمِيتُ فَإِذَا قَضَىٰ أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُ كُنْ فَيَكُونُ ﴿٦٨﴾

69. Ka warran kuwa ku murmi aayaadka Eebe xagee looga iili xaqa.

﴿أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يُجَادِلُونَ فِي آيَاتِ اللَّهِ أَنْ يَتَّبِعُونَ ﴿٦٩﴾

70. Kuwa beeniyay Kitaabka «Quraanka» iyo waxaan la soo dirray Rasuulladanada way ogaan doonaan, cidhibtooda.

﴿الَّذِينَ كَذَّبُوا بِالْكِتَابِ وَمَا أُرْسِلْنَا بِهِ رَسُولُنَا فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ﴿٧٠﴾

71. Marka Katiinado layeelo Luquntooda Silsiladana lagu jiido.

﴿إِذِ الْأَعْلَىٰ فِي أَغْتَابِهِمُ وَالسَّلَسِلَ يُسْحَبُونَ ﴿٧١﴾

72. Kulayl haddana «Naar» lagu jiido.

﴿فِي الْحَمِيمِ ثُمَّ فِي النَّارِ يُسْجَرُونَ ﴿٧٢﴾

73. Markaas lagu dhaho aaway waxaad la wadaajiseen cibaadada.

﴿ثُمَّ قِيلَ لَهُمْ إِنَّنَا مَا كُنْتُمْ تُشْرِكُونَ ﴿٧٣﴾

74. Eebe ka sokoow, waxayna odhan waa naga Dhumeen (waynay), mase aanaan ahayn kuwo Wax ucaabuday horay, saasuuna Eebe udhumiya Gaa-lada.

﴿مِنْ دُونِ اللَّهِ قَالُوا صَلُّوا عَلَيْنَا لَمْ تَكُن تَدْعُوا مِن قَبْلُ شَيْئًا كَذَلِكَ يُضِلُّ اللَّهُ الْكَافِرِينَ ﴿٧٤﴾

75. Taasina waa waxaad ugu farxi jirteen Xumaanta dhulka dhexdiisa xaqa daro iyo Waxaad la kibri jirteen.

﴿ذَلِكَ بِمَا كُنْتُمْ تَفْرَحُونَ فِي الْأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَبِمَا كُنْتُمْ تَمْرَحُونَ ﴿٧٥﴾

76. Ee gala irdaha jahannamo idinkoo ku Waari waxaana u xun meeluu ku hoydo isla wayna Naarta Jahanamo.

أَدْخَلُوا أَبْوَابَ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا قَبَسَ مَثْوَى
الْمُتَكَبِّرِينَ ﴿٧٦﴾

Eebe wuxuu dadka ku adkeeyay inay isaga uun caabudaan, una hogaansamaan Nabiguna Waa ka fogyahay inuu ujeedsado waxaan Eebe ahayn ee waa guubaabo dadka.

Awooddana Eebaa iska leh, dadkana abuuray dilina doona, ciddii xaq darro xaq darro ku muranta oo kibirta oo caabudda Eebe ka sokow wax kale ama xumaan ku addecda Wuxuu gali naarta isagoo dulaysan oo xidhxidhan. Ghaafir (66-76).

77. Samir (adkayso) nabiyoow yabooha Eebe waa xaqe, haddaannu ku tusinno waxa (guusha) aannu Kuu yaboohi qaarked (intaad nooshahay waa Waanaag), amaan ku oofsanno (intaas Ka hor) Xagaganagaa loo soo celin (gaaladaas).

فَأَصْبِرْ إِنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ فِيمَا نُرِيَّتَكَ بَعْضَ
الَّذِي نَعُدُّهُمْ أَوْتَوْقِيَّتَكَ
فَالْيَوْمَ نَأْتِي جَمُوتَ ﴿٧٧﴾

78. Waxaan dirray rasuullo adiga hortaa Waxaa ka mid ah kuwo aan kaaga qisoonay iyo kuwo aanaan kaaga qisoonin, rasuulna aayad (mucjisad) ah idiin Lama imaan karo idanka Alle la'aantiis hadduuse yimaado amarka Eebe (cadaabkiisu) waxaa la Xukumi xaq waxaana ku khasaaray halkaas kuwa Xumaanlowga ah.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلًا مِنْ قَبْلِكَ مِنْهُمْ مَنْ قَصَصْنَا
عَلَيْكَ وَمِنْهُمْ مَنْ لَمْ نَقْصُصْ عَلَيْكَ وَمَا كَانَ
لِرَسُولٍ أَنْ يَأْتِيَ بِعَاقِبَةٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ فَإِذَا جَاءَ أَمْرُ
اللَّهِ فَفُضِيَ بِالْحَقِّ وَخَسِرَ هُنَالِكَ
الْمُبْطِلُونَ ﴿٧٨﴾

79. Eebe waa kan idiin yeelay Nicmoolayda (xoolaha) inaad waxna ka fuushaan waxna ka cuntaan.

اللَّهُ الَّذِي جَعَلَ لَكُمْ الْأَنْعَامَ لِتَكُونُوا مِنْهَا
وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ ﴿٧٩﴾

80. Waxaana idinka sugnaaday dhexdeeda Nacfi iyo inaad ku gaadhaan danihiina Laabta idinkaga jira, korkeeda iyo doonta Ayaana la idinku xambaaraa.

وَلَكُمْ فِيهَا مَتَاعٌ وَاسْتَبَعُوا عَلَيْهَا حَاجَةً فِي
صُدُورِكُمْ وَعَلَيْهَا وَعَلَى الْفَالِكِ
تُحْمَلُونَ ﴿٨٠﴾

81. Wuxuuna idin tusiyaa aayaadkiisa ee teed aayaadka Eebe diidaysaan.

وَيُرِيكُمْ آيَاتِهِ فَأَيَّ آيَاتِ اللَّهِ
تُنْكِرُونَ ﴿٨١﴾

Samirka iyo Adkaysigu wax badanbaa quraanka lagu sheegay, Eebana wuxuu nabiga u yaboohay inuu abaal marin gaaladii xaq diiday, ama adduun iyo Nolosha nabiga ama aakhiro. tan kale wuxuu Eebe inoo sheegay in rasuuladii uu diray qaarna ka qisooday kuwo kalana uu ka aamusay, wax mucjisad la imaan kara idan Eebe la'aantiina ma jiro, markase amarka Eebe yimaado dad waa lakala xaqi xumaanlowna halkaasuu ku khasaaray, Eebana waa kan inoogu nicmeeyey xoolaha doonyaha iyo

gaadiidka kale ee la raaco, si danaha loo gaadho, Wuxuuna ina tusiyaa aayaadhiisa mana haboona in la diido aayaadkaas. saasdarteed waa in Eebe nicmadiisa la aqoonsado laguna mahadiyo wanaaggana loogu kaalmaysto. Ghaafir (77-81).

82. miyayna ku soconin dhulka oo ay fiiriyaan Siday noqotay cidhibtii kuwii ka horreeyay, waxay ahaayeen kuwo ka badan kana xoog badan iyo camiridda dhulka, waxna uma tarin waxay kasbaadeen.

أَفَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرُوا كَيْفَ كَانَ
عَاقِبَةُ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ كَانُوا أَكْثَرًا مِّنْهُمْ
وَأَسَدُّ قُوَّةً وَءَانَارًا فِي الْأَرْضِ فَمَا أَعْنَىٰ عَنْهُمْ
مَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿٨٢﴾

83. markay ula yimaadeen rasuuladoodii xujooyin waxay ku farxeen gaaladi waxa agtooda ah oo cilmi ah, waxaana ku dagay waxay ku jees-jeesi jireen (abaalkiisii).

فَلَمَّا جَاءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِالْبَيِّنَاتِ فَرِحُوا بِمَا
عِنْدَهُمْ مِنَ الْعِلْمِ وَحَاقَ بِهِم مَّا كَانُوا بِهِ
يَسْتَهْزِئُونَ ﴿٨٣﴾

84. markay arkaan cadaabkanaga waxay dhahaan waxaan rumaynay Eebe kaliya waana diidnay waxaan Eebe la wadaajin jirray.

فَلَمَّا رَأَوْا بَأْسَنَا قَالُوا آمَنَّا بِاللَّهِ وَحَدُّهُ وَسَكَرْنَا
بِمَا كُنَّا بِهِ مُشْرِكِينَ ﴿٨٤﴾

85. Mana aha kuu anfici iimaankoodu markay Arkaan cadaabkanaga, waa sunnada (dariiqada) Eebe ee u horaysay adoomadiisa, waxaana ku khasaaray halkaas gaalada.

فَلَمْ يَكْ يَنْفَعُهُمْ إِيمَانُهُمْ لَمَّا رَأَوْا بَأْسَنَا سَبَّتَ اللَّهُ
الَّتِي قَدْ خَلَّتْ فِي عِبَادِهِ وَخَسِرَ هُنَالِكَ
الْكَافِرُونَ ﴿٨٥﴾

Aayadahan waxay ka warrami in ay haboontahay in dhulka lamaro laguna Waano qaato sida Eebe ku falay kuwii xoogga badnaa ee dhulka camiray ee horreeyey, waxna uusan utarin waxay kasbaadeen, markay rasuuladii u Yimaadeen iyagoo mucjasad watana ay diideen kuna farxeen waxay haystaan oo cilmi ah, ciqaabna markaas ku dhacday. markayse gaaladu iyo xumaanlawgu arkaan dhabta yay qayliyaan diidaana waxaycaabudi jireen ama ku dhaqmi jireen, markaasoo kalase rumayni wax ma tarto waana jidka Eebe ee horreeyay, waxaana halkaas qiyaamada ku khasaari gaalo, xadiithna waxaa ku sugnaaday in (Eeb aqbaloo tawbadda adoonka intaan sakaraadku u imaan). Khasaaraha dhabta ahna waa kan qiyaame. Ghaafir (82-85).



Suorat Fussilat

سُورَةُ الْفُصِّلَاتِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada Quraanka sida soo hormartay.

حَمْدٌ

2. Quraanka waa soo dajinta Eebe naxariista guud iyo mid gaaraba naxariista.

تَنْزِيلٌ مِنَ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ ١

3. Waana Kitaab loo caddeeyey aayaadhiisa isagoo Quraan carabi ku qoran ah ciddii wax garan.

كِتَابٌ فَضَّلْتَهُ لِأُمَّةٍ وَقَدْ آتَيْنَا نَبِيًّا قَوْمٍ يَعْلَمُونَ ٢

4. Waana bishaareeye u dige ah, waase ka jeedsadeen badankoodu waxna ma maqlayaan.

بَشِيرًا وَنَذِيرًا فَأَعْرَضَ أَكْثَرُهُمْ فَهُمْ لَا يَسْمَعُونَ ٣

5. Waxayna dheheen quluubtanadu waxay kaga sugantahay dabool waxaad noogu yeedhi, dhagahanagana waxaa kaga jira culeys, dhexdanada iyo adiga-na waxaa ah xijaab, ee camal fal anana waancamalfaleynaaye.

وَقَالُوا أَفُلَوْبِنَا فِي أَعْيُنِنَا مِمَّا نَدْعُونَ إِلَيْهِ فِي ذَاتِنَا وَقَدْ رَأَيْنَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكَ حِجَابًا فَاَعْمَلْنَا عَمَلُونَ ٤

6. Waxaad dhahdaa Nabiyoow anigu waxaan uun ahay bashar (Dad) idinkookale ah, waxaana la iiwaxyooday in Macbuudkiinnu mid kaliya yahay, ee u toosnaada xaggiisa, kana dambidhaaf waydiista, halaagna wuxuu u sugnaaday mushrikiinta.

قُلْ إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ مِثْلُكُمْ يُوحَىٰ إِلَيَّ أَنَّمَا إِلَهُكُمُ اللَّهُ وَحْدًا فَاسْتَعِظُوا إِلَيْهِ وَاسْتَغْفِرُوهُ ۖ وَوَيْلٌ لِّلْمُشْرِكِينَ ٥

7. Kuwaan bixinin sakada ahna aakhiro kuwa ka gaaloobey.

الَّذِينَ لَا يُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَهُمْ بِالْآخِرَةِ هُمْ كَافِرُونَ ٦

8. Kuwa xaqa rumeeyeyse oo camalfiican falay waxaa usugnaaday ajri aan guraynin.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ أَجْرٌ غَيْرُ مَمْنُونٍ ٧

Quraanka oo aayadihiisa cadcadyihiin Eebaa u soodajiyey isagoo carabi ah ciddii garan, Bishaareeyey diga ha, Dadka badidiise waa ka jeedsadeen, mana maqlaan waxayna sheegteen inay qalbiga ka daboolanyihiin, Dhagahana ka culusyihiiin xaqana xijaab ka xigo, Nabiguse waa bashar waxaana loo waxyooday in Eebe kaliya Ilaahyahay, lana toosnaado dambi dhaafna la wardaso waxaana halaagsamay gaaladaan Zakada bixinin aakhirana diiday. waxaase ajri aan go'ayn mudan kuwa xaq rumayn iyo camal fican isku daray. Fuşşilat (1-8).

9. Waxaad dhahdaa Nabiyou idinku ma waxaad ka gaaloobaysaan kan (Eebaha) ku abuuray Dhulka laba maalmood, ood uyeelaysaan kuwo la mid ah, kaasi waa Eebaha Caalamka.

﴿قُلْ أَيُّكُمْ أَكْفَرُونَ بِالَّذِي خَلَقَ الْأَرْضَ فِي
يَوْمَيْنِ وَجَعَلَ لَهَا آدْنًا ذَٰلِكَ رَبُّ الْعَالَمِينَ ﴿٨﴾

10. Wuxuuna yeelay Dhulka dhexdiisa Buuro wuuna barakeeyey dhexdiisa una qadaray (u qiyaasay) Cunnadiisa afar maalmood iyadooy usimantahay dadka weydiin.

وَجَعَلَ فِيهَا رِوَايَ مِنْ فَوْقِهَا وَبَرَكَ فِيهَا
وَقَدَّرَ فِيهَا أَقْوَامَهَا فِ أَرْبَعَةِ أَيَّامٍ سَوَاءٍ
الْأَسَابِلِ ﴿٩﴾

11. Markaasuu Eebe u istawooday (qasday) Cirka oo qiiq ah kuna yidhi Cirka iyo Dhulka ahaada idinkoo adeecsan ama la ikraahi (laqasbi) waxayna dheheen waan nimid anagoo adeecsan.

ثُمَّ أَسْمَوْنَاهُ إِلَى السَّمَاءِ وَهِيَ دُخَانٌ فَقَالَ لَهَا
وَالْأَرْضِ أَيْنَ أَطْوَعَا أَوْ كَرِهَا قَالَتَا أَتَيْنَا
طَائِعِينَ ﴿١٠﴾

12. Wuxuuna Eebe ka abuuray Cirka Todobo Samo laba maalmood wuxuuna faray Samo kasta amarkeedii, waxaana ku qurxinay Cirka dhaw Misbaaxyo, waana ilaalinay, taasina waa qadaridda (maamulka) Eebaha adkaada ee wax og.

فَقَضَيْنَاهُنَّ سَبْعَ سَمَوَاتٍ فِي يَوْمَيْنِ وَأَوْحَىٰ فِي كُلِّ
سَمَاءٍ أَمْرَهَا وَزَيَّنَّا السَّمَاءَ الدُّنْيَا بِمَصْبِيحٍ
وَحِفْظًا ذَٰلِكَ تَقْدِيرُ الْعَزِيزِ الْعَلِيمِ ﴿١١﴾

Mahaboona in laga gaaloobo Eebaha wax walba abuuray sida Dhulka, Cirka iyo wax kasta mana haboona in looyeelo waxlamid ah oo lalo caabudo, illeen isagaa inoo barakeeyey dhulka iyo Cirka, kana yeelay wadada noolaanshaha, mid kasta udarbay wax looga baahanyahay, aayadahan iyo kuwa kalee ka warrami abuurka Cirka iyo Dhulka wax isdiidaya ama iska hor iman ma aha, Ibnu Cabaas waxaa laga wariyey inuu Eebe Dhulka ka abuuray Laba maalmood, markaas Cirka abuuray, dhulka fidiyey fidinteeduna waa inuu ka soo bixiyey Biyo, Carro, yeeleyna Buuro, Bacaad iyo Tuurar waxayna noqotay muddadu lix bari ah. saas darteed wax iska hor imaan iyo wax isburin midna jiro, kaasaana Eebaha xaqa ah ayna waajibtay in si dhab ah loo caabudo sharcigiisana loo raaco loona gaadhsiiyo Caalamka si haboon. Fuşşilat (9-12).

13. Hadday ka jeedsadeen Gaaladu (xaqa) waxaad ku dhahdaa Nabiyou

إِن أَعْرَضُوا فَقُلْ أَنْذَرْتُكُمْ صَاعِقَةً مِثْلَ صَاعِقَةِ

waxaan idiibka digi cadaab daran oo lamid ah kii Reer Caad iyo Thamuud.

14. Markay ugaga timid Rasuuladii hor iyo gadaalba, iyagoo ku leh ha caabudina waxaan Eebe ahyn, ayna ku dhaheen hadduu doono Eebeheen wuxuu soo dajinlahaa Malaa'ig, anaguna waxa laydiin soo diray waan ka gaalownay.

15. Reer Caad iyagu way isku kibriyeen Dhulka xaq darro, waxayna dheheen yaa naga xoog badan, miyeyna arag Eebaha abuuray inuu ka xoogbadanyahay waxayna ahaayeen kuwo aayaadkanaga diidan.

16. Waxaana ku dirray korkooda Dabayl qaylo daran Todobo Maalmood oo uxun (iyaga) si aan u dhandhansiino cadaabka dulliga Nolosha adduun, cadaabka aakhiraana ka sii dulli badan loomana gargaaro.

Wuxuu Eebe faray Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) inuu haday Gaaladu ka jeedsadaan xaqa uu uga digo ciqaab daran oo lamid ah tii Caad iyo Thamuud, markay Rasuuladoodii fareen inay Eebe kaliya caabudaan ayna diideen iskibriyeenna xumaan darteed. markaas Caad Eebe ku halaagay Debeyl daran ayna dhadhamiyeen Cadaabkii dulliga iyadoo aakhiro Cadaabkeedana u dheeryahay, aayaduhuna waxay cadayn ku sugnaanta xaqa, in Eebe ciqaabi xaqdiide, in Rasuuladii u wada yeedhi jireen cibaadada Eebe kaliya in xoogga iyo Quwada Eebe wax walba ka darantahay, waajibna tahay in laga dhawrsado. Fuşşilat (13-16).

17. Ree Thamuud waxaantusinay xaqa, waxayna ka jeclaadeen indho la'aan (baadi) hanuunkii, waxaana qabtay qaylo cadaab wax dulleeya, waxay kasbanayeen darteed.

18. Waxaana korinay kuwii rumeeyey (xaqa) oo dhawrsan jiray.

19. (u sheeg gaalada) Maalinta lagu kulmin colka Eebe naarta iyagoo is cidhiidhyi.

عَادٍ وَثَمُودَ ﴿١٣﴾

إِذْ جَاءَتْهُمْ الرُّسُلُ مِنْ بَيْنِ أَيْدِيهِمْ وَمِنْ خَلْفِهِمْ أَلَّا يَعْبُدُوا إِلَّا اللَّهَ قَالُوا لَوْ شَاءَ رَبُّنَا لَأَنْزَلَ مَلَائِكَةً فَأَنبَأَنَا أُرْسِلْتُمْ بِهِ كُفْرًا ﴿١٤﴾

فَأَنبَأَعَادًا فَاسْتَكْبَرُوا فِي الْأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَقَالُوا مَنْ أَشَدُّ مِنَّا قُوَّةً أَوَلَمْ يَرَوْا أَنَّ اللَّهَ الَّذِي خَلَقَهُمْ هُوَ أَشَدُّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَكَانُوا بِآيَاتِنَا يَجْحَدُونَ ﴿١٥﴾

فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِيحًا صَرْصَرًا فِي أَيَّامٍ نَحْسَاتٍ لِنُبَيِّنَهُمْ عَذَابَ الْجَزَاءِ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَلَعَذَابُ الْآخِرَةِ أَخْزَىٰ وَهُمْ لَا يُبْصِرُونَ ﴿١٦﴾

وَأَمَّا ثَمُودُ فَهَدَيْنَاهُمْ فَاسْتَحَبُّوا الْعَصَىٰ عَلَى الْهُدَىٰ فَأَخَذَتْهُمْ صَيْعُهُمُ الْعَذَابِ الَّهُونِ بِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿١٧﴾

وَجَعَلْنَا الَّذِينَ آمَنُوا وَكَانُوا يَتَّقُونَ ﴿١٨﴾

وَيَوْمَ يُنْفَخُ الْعَذَابُ عَنْ أَهْلِ النَّارِ فَهُمْ يَبُورُونَ ﴿١٩﴾

20. Markay yimaaddaana uu ku maragfuro korkooda, maqalkooda, aragoodu, iyo haragoodu (jidhkoodu) waxay falijireen.

حَتَّىٰ إِذَا مَا جَاءَهُمْ وَهَاهُم بِغَلَبَتِهِمْ سَمِعْتَهُمْ
وَأَنصَرَفْتَهُمْ وَجَلُودُهُمْ بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٧﴾

21. ayna ku dhahaan korkooda (Jidhkooda) maxaad noogu marag kacdeen, ayna ku dhahaan waxaa naga hadliyey, Eebaha ka hadliya wax kasta isagaana idin abuuray markii hore xagiisaa laydiin celin.

وَقَالُوا لَوْلَا جِئُوا بِآيَاتٍ مِنَّا فَذَرْهُمْ لِيَشْهَدُوا لِقَابِ رَبِّهِمْ أَفَلَا يَتَذَكَّرُونَ
أَلَمْ يَكُن لَكُمْ آيَاتُ الْكُرْسِيِّ أَن تَتَمَتَّعُوا بِالْأَمْوَالِ الَّتِي مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ وَأَنْتُمْ بِالْآيَاتِ
تَعْمَلُونَ ﴿١٨﴾

22. Mana aydaan ahayn kuwa iska astura inay ku maragkacaan maqalkiinu, araggiinu iyo haraggiinu, waxaadse u malayseen inuusan Eebe ogayn wax badan ood falaysaan.

وَمَا كُنْتُمْ تَسْتَشِيرُونَ أَن يَشْهَدَ عَلَيْكُمْ سَمْعُكُمْ
وَأَلْبَابُكُمْ وَأَبْصَارُكُمْ وَلَا جُلُودُكُمْ وَلَكِنْ ظَنَنْتُمْ أَنَّ اللَّهَ
لَا يَعْلَمُ كَيْفَ يَرَاهُمْ أَفَلَا يَتَذَكَّرُونَ ﴿١٩﴾

23. kaasina waa malihiiini aad u malayseen Eebihii isagaana idin halaagay, waxaadna ahaateen kuwo khasaaray.

وَذَلِكُمْ ظَنُّكُمُ الَّذِي ظَنَنْتُمْ بِرَبِّكُمْ أَرَأَيْتُمْ
فَأَصْبَحْتُمْ مِنَ الْخَاسِرِينَ ﴿٢٠﴾

24. haday samraanna naarbaw ku hoyan hadday cudur daar dalbaana lagama aqbalo.

فَإِنْ يَصْبِرُوا فَالنَّارُ مَثْوًى لَهُمْ وَإِنْ يَسْتَعِذُّوا فَلَا يَمْلِكُ
مِنَ الْمُعْتَدِينَ ﴿٢١﴾

Thamuudna wax badan buu Quraanku ka waramey xaalkooda iyo siday xaqa u beeniyeen iyo sidii loo halaagay, gaalana Eebe dhamaan wuu kulmin wuxuuna ku uruurin naarta, waana in la ogaado inuu jidhkaagu kugu maagfuri waana waajib in xumaanta laga fogaado si ayan kuugu marag furin xubnaagu, wax walbana Eebaa ka hadliya. ciddii malaysa inaan Eebe ogayn wuxuu fali ama uusan koobin wax walba waa cid khasaartay. Fuṣṣilat (17-24).

25. Waxaan u darabnay Gaalada saaxiibo u qurxiya waxa ka horeeya, iyo waxa ka dambeeya, waxaana ku xukunaatay hadalkii Eebe iyagoo umada kale ku dhex sugan (oo la cadaabi) oo ka horeeyey Jinni iyo Insina leh waxayna ahaayeen kuwo khasaaray.

* وَيَقْتُلُوا الَّذِينَ كَفَرُوا وَإِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيُذْهِبَ
عَنْكُمُ الرِّجْسَ أَهْلَ الْبَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيرًا
وَمَا خَلَقَهُمْ وَحَقَّ عَلَيْهِمُ الْقَوْلُ فِي أُمَمٍ قَدْ خَلَتْ مِن
قَبْلِهِم مِّنَ الْجِنِّ وَالإِنسِ إِنَّهُمْ كَانُوا خَاسِرِينَ ﴿٢٢﴾

26. Waxay dhaheen kuwii Gaaloobay ha maqlina Quraanka kuna qaylta (marka la akhrin) waxaad u dhawdhiin inaad adkaataane.

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لَا تَسْمَعُوا لِهَذَا الْقُرْآنِ
وَالْعَرَابُ لَا يُعْقِلُونَ ﴿٢٣﴾

27. Waxaan dhadhansiinaynaa kuwii Gaaloobay Cadaab daran, waxaana ka

فَلْيَذُكَّرْهُمُ الَّذِينَ كَفَرُوا وَعَدَابًا شَدِيدًا

abaaalmarinaynaa kii ugu xumaa waxay camal falayeen.

وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَشْرَ الَّذِي كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٧﴾

28. Kaasi waa abaaalmarinta colka Eebe, waxayna gali Naar iyadoo u noqon Guri waarid, iyagoo laga abaal marin ayaadkanaga aydiideen.

ذَلِكَ جَزَاءُ أَعْدَاءِ اللَّهِ الَّذِينَ آذَوْا آلَهُمْ فِيهَا دَارَ الْمُقَدَّرِ جَزَاءً
بِمَا كَانُوا يَعْلَمُونَ بِجَحْدُونَ ﴿١٨﴾

29. Waxay dheheen kuwii Gaaloobay Eebow na tusi labadaas nadhumiyey oo Jinni iyo Insi ah aan yeello Gomadahanaga hoostoodee si ay u noqdaan kuwo ku hooseeya (Naarta).

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا رَبَّنَا أَرِنَا الَّذِينَ أُضِلَّآتَانِ
الْجِنِّ وَالْإِنْسِ جَعَلَهُمَا نَجَاتٍ أَقْدَامًا لِيَكُونَ مِنَ
الْآسَفِينَ ﴿١٩﴾

Eebe isagaa awooda leh wuxuu doonana fali Gaaladana markey Jidka wanaaga ka leexdeen yuu Eebe ku lamaaneeyeyey mid kasta Shaydaan u qurxiya xumaanta, halmaansiiyana wanaagaa, illeen ciqaabaa u waajibta, wayna khasaareen, waxayna ahaayeen kuwo Quraanka ku ciyaara kuna qaylya waqtiga la akhriin si ay u waswaasiyaan waxaana lagu abaalmarin cadaab daran, waxaana laga abaalmarin camalkoodii xumaa, waana abaalka colka Eebe saasi waxayna kuwaari Naar daran iyoagoo Eebe warsan inuu tusiyo kuwii dhumiyeey Jinni iyo Insi si ay ugu istaagaan Naarta dhexdeeda una yeelaan Cagahooda hoostooda. maxayse tari taasi mar haday Naar galeen, Xadiithna waxaa ku sugnaaday: in Ruux kastoo Gardarro loo dilo waxaa qeyb ku yeelan ina Nabi Aadamkii dilka billaabay. Fuṣṣilat (25-29).

30. kuwa yidhi Eebahanno waa Alle hadana toosnaaday waxaa ku soo dagta Malaa'igta (markey dhiman iyadoo ku dhihi) ha cabsanina hana murugoonina, kuna bishaareysta Jannadii laydiin yaboohay.

إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّهُ ثُمَّ اسْتَقَمُوا اسْتَجَبْنَا لَهُمْ
عَلَيْهِمُ الْمَلَكُوتُ بِالْإِخْفَاءِ وَالْأَنْحَادِ
وَأَنْشُرُوا بِالْجَنَّةِ الَّتِي كَانَتْ تُوعَدُونَ ﴿٢٠﴾

31. anagaa sokeeye idiin ah nolosha adduunyo iyo aakhiraba, waxaana idiinsugnaaday dhexdeeda waxay doonto Naftiinnu waxaadna ka heleysaan waxaad dalabtaan.

نَحْنُ أَوْلَىٰ أَوْكُمُ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَفِي الْآخِرَةِ
وَلَكُمُ فِيهَا مَا تَشْتَهُنَّ أَنْفُسُكُمْ وَلَكُمُ فِيهَا
مَا تَدْعُونَ ﴿٢١﴾

32. Waana martiqaadka Eebaha dambi dhaafa ee Naxariista.

زُلْزَلًا مِنْ عَقُورٍ رَجِيبٍ ﴿٢٢﴾

33. Yaa ka fiican hadal ruux ugu yeedhay (Dadka) Eebe xagiisa, oo camalfiican sameeyey, oo dhaha anigu waxaan ka mid ahay Muslimiinta.

وَمَنْ أَحْسَنُ قَوْلًا مِمَّنْ دَعَا إِلَى اللَّهِ وَعَمِلَ
صَالِحًا وَقَالَ إِنِّي مِنَ الْمُسْلِمِينَ ﴿٢٣﴾

34. Mana eka Wanaag iyo Xumaan, reebna oo (bixi) arrinta fiican markaas

وَلَا تَسْتَوِي الْحَسَنَةُ وَلَا السَّيِّئَةُ ادْفَعْ بِالَّتِي

waxaa soobixi in midkii col idin dhexyiil uu noqon sokeeye iyo saaxiib.

35. Lalamana kulmiyo arrintaas kuwii samrey mooyee, lalamana kulmiyo mid nasiib weyn leh mooyee.

هِيَ أَحْسَنُ فَاذًا الَّذِي بَيْنَكَ وَبَيْنَهُ عَدَاوَةٌ
كَأَنَّهُ وَوَلِيٌّ حَمِيمٌ ﴿٢٥﴾
وَمَا يُلْقِيهَا إِلَّا الَّذِينَ صَبَرُوا وَمَا يُلْقِيهَا إِلَّا
دُوحًا عَظِيمًا ﴿٢٥﴾

Sufyaan Binu Cabdullaahi waxaa laga wariyey inuu yidhi: Rasuulkii Eebow iisheeg arrin aan isku ilaaliyo, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe hayeelee) wuxuu yidhi: (Dheh Eebahay waa Alle kuna toosnoow waxaan idhi maxaad iigu cabsi badantahay, markaasuu qabtay caaradda carabkiisa, oo yidhi: Kan) waxaa wariyey Tirmidi, Axmed iyo Ibnu maajah. waxayna ku tusin wanaagga toosnaanta iyo in Eebe dartiis loogu yeedho Dadka, laguna faano Islaamnima cen laga xishoon, Xumaan iyo Wanaagna ma sina ee had iyo jeer wanaagga ku dhaqan ha ku jiclaado xaataa midka colka kula ahe, waxaa saas yeeli ruux fiican oo chelu khayr ah, had iyo jeerna Eebe ka magangala shaydaan iyo was waaskiisa waana kaas Islaamka toosana ee Xaqa ah ee haboon. Fuṣṣilat (30-35).

36. Hadduu ku waswaasiyo shaydaan xaggiisa waswaasiye ka magangal Eebe isagaa wax maqla waxna oge.

وَمَا يَزَعْنَكَ مِنَ الشَّيْطَانِ نَزْعٌ فَاسْتَعِذْ بِاللَّهِ
إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٢٦﴾

37. Aayaadka Eebe (jiridiisa iyo qudradiisa) waxaa ka mid ah Habeenka, Maalinta, Qorraxda iyo Dayaxa, ha u sujuudina Qorraxda iyo Dayaxa ee u sujuuda Eebaha abuuray haddaad tihiin kuwo (dhab) u caabudi.

وَمِنْ آيَاتِهِ اللَّيْلُ وَالنَّهَارُ وَالشَّمْسُ وَالْقَمَرُ
لَا تَسْجُدُ لِلشَّمْسِ وَلَا لِلْقَمَرِ وَاسْجُدُوا لِلَّهِ
الَّذِي خَلَقَهُنَّ إِن كُنتُمْ إِيَّاهُ تَعْبُدُونَ ﴿٢٧﴾

38. Haday iska kibriyaan (cibaadada) kuwa Eebahaa agtiisa ah way u tasbiixsadaan Habeen iyo Dharaarba kana noogin.

إِن أَسْتَكْبَرُوا فَالَّذِينَ عِنْدَ رَبِّكَ
يُسَبِّحُونَ لَهُ بِاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ وَهُمْ
لَا يَسْتَمِعُونَ ﴿٢٨﴾

39. Aayaadka Eebe waxaa ka mid ah inaad aragtid Dhulkoo dulleysan (abaar ah) markaan ku soo dajinno Biyaha uu gilgisho soona kor noqdo, midka nooleeyey wuxu nooleyn wixii dhintay wax walbana wuu karaa.

وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ تَرَى الْأَرْضَ خُشْعَةً إِذًا أَنْزَلْنَا
عَلَيْهَا الْمَاءَ أَهْرَازَتْ وَرَبَّتْ إِن الَّذِي أَحْيَاهَا لَمَتَّحِي
الْمَوْتِ إِنَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٩﴾

40. Kuwa iilaya aayaadkanaga nagama qarsoona, ruux lagu tuuray Naarta miyaa khayrroon mise mid isagoo aamin ah imaan Qiyaamada, fala waaxaad doontaan, Eebe waxaad faleysaan waa arkaa.

إِنَّ الَّذِينَ يُلْحِدُونَ فِي آيَاتِنَا لَا يَخْفَوْنَ عَلَيْنَا أَفَن
يُلْقَى فِي النَّارِ خَبْرًا مِّن بَآئِنٍ مَّا سَأَلُوا مِنَ الْفَيِّمَةِ أَعْمَلُوا
مَا شِئْنُوهُ إِنَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٣٠﴾

41. Kuwa ka gaaloobay Quraanka

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا بِالذِّكْرِ لَمَّا جَاءَهُمْ وَإِنَّهُمْ لَكَاذِبُونَ

markuu u yimid (waa la abaal marin)
waana Kitaab qaali ah.

عَزِيزٌ ﴿٤١﴾

42. Mana timaado xumaan hortiisa iyo
gadaashiisa, (waa dhawran yahay) waa-
na soo dajinta Eebaha falka san ee
lamahdiyo.

لَا يَأْتِيهِ الْبُطْلُ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ وَلَا مِنْ خَلْفِهِ تَنْزِيلٌ
مِّنْ حَكِيمٍ حَمِيدٍ ﴿٤٢﴾

43. Lagumana dhaho waxaan ahayn
wixii lagu yidhi Rasuuladii ka hor-
reeyey, Eebahaana waa dambi dhaafe
ciqaab daran.

مَا يَقَالُ لَكَ إِلَّا مَا قَدَّ قِيلَ لِلرُّسُلِ مِنْ قَبْلِكَ إِنْ
رَبُّكَ لَذُو مَعْفِرَةٍ وَذُو عِقَابٍ أَلِيمٍ ﴿٤٣﴾

had iyo Jeer Shaydaanku wuxuu u darbanyahay inuu dadka waswaasiyo xaqana ka leexiyo waxaase lagaga nabad gali karaa isagoo Eebe la magan galo laguna Xidhnaado illeen waa Maqle oge. Eebe Calaamaadka awoodda iyo jiridiisa waxaa ka mid ah abuurkiisa, sida Habeenka Maalinta, Qoraxda iyo Dayaxa, wax sujuud mudan oo Eebe ahayn ma jiro, ciddii isla waynaata oo cibaadada diida waxba Eebe ugama baahna waxaa Malaa'igita Eebe Qadasi Habeen iyoi Dharaar si joogta ahoon daal lahayn. ciddii soo bixin diidana ha eegto Roobka iyo dhulka, ciddiiise leexisa Quraanka oo ku ciyaarta macnihiisa iyo Fasirkiisa iyo si kasta Eebe kama qarsoona wuuna abaalmarin, cid Naar lagu tuurayna la mid ma aha mid Kanabadgashay Qiyaamada, Kitaabka quraanka ahna waa Kitaa qaali ah oo xumaan ka dheer ciddii diida ama ku dhaqmi wayda Eebaa abaalmarin. Gaalana inayhadal xun ku dhahaan Rasuulada caaday u tahay waase laga abaalmarin. Fuṣṣilat (36-43).

44. Hadaan kayeelo «Kitaabka» Quraan
Cajami ah waxay dhihi lahaayeen ma-
xaa loo caddayn waayey Aayaadkiisa,
ma (quraan) Cajami ah iyo Nabi (Carabi
ah) waxaad dhahdaa isagu kuwa
rumeeeyey wuxuu u yahay Haanuun iyo
Caafimaad, kuwa aan rumeynina dha-
gahooda waxaa ah culays, waana ka
indha la'yihiiin kuwasna waxaa looga
yeedhi meel fog. (waa tusaale sida aanay
wax u maqlaynin, Xaqana u aqbal-
aynin, Sida iyadoo meel Fog looga
dhawaaqaayo oyna maqlayn ka u dha-
waaqi).

وَلَوْ جَعَلْنَاهُ قُرْءَانًا أَعْجَبًا لَأَقَالُوا لَوْلَا نُفِصَلَتْ
آيَاتُهُ وَءَاثَعَجِبُوا وَعَرَفُوا قُلْ هُوَ لِلَّذِينَ آمَنُوا
هُدًى وَبَيِّنَاتٌ وَالَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ فِي آذَانِهِمْ وَقُرْ
وَهُوَ عَلَيْهِمْ عَمًى أُولَئِكَ يُنَادَوْنَ مِنْ
مَكَّانٍ بَعِيدٍ ﴿٤٤﴾

45. Dhab ahaanbaan u siinay Nabi
Muuse Kitaabka waana laysku khilaa-
fay, haddayan jirin kalimo ka hormar-
tay Eebahaa waa lakala xukminlahaa
dhexdooda waxayna ku suganyihiin
gaaladu shaki daran.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ فَآخْتَلَفَ فِيهِ
وَلَوْلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتْ مِنْ رَبِّكَ لَفُضِّضُوا بَيْنَهُمْ
وَإِنَّهُمْ لَفِي شَكٍّ مِّنْهُ مُرِيبٍ ﴿٤٥﴾

46. Ruuxii camalfiican fala wuxuu u falay Naftiisa, Ruuxii xumaan fala wuxuu dhibay Naftiisa, Eebaheenna ma aha dulmiyaha Addoomada.

مَنْ عَمِلَ صَالِحًا فَلِنَفْسِهِ ۖ وَمَنْ أَسَاءَ فَعَلَيْهَا ۚ
وَمَا رَبُّكَ بِظَلَّامٍ لِّلْعَمِيدِ ﴿٤٦﴾

47. Xagiisana loo celiyaa ogida Saacad-da (Qiyaame) midhana kama sooba-xaan Sabuulkooda, mana uuroobo Dhadig mana dhalo oggaanshaha Eebe la'aantiis, Malintuu ku dhihi away kuwaad ila wadaajiseenna waxay dhihi waxaan ku ogaysiinnay Nagamidma aha Ruux marag furi arintaas.

* إِلَيْهِ يُرَدُّ عِلْمُ السَّاعَةِ ۖ وَمَا تَخْرُجُ مِنْ ثَمَرَاتٍ مِنْ أَكْمَامِهَا وَمَا تَحْمِلُ مِنْ أُنثَىٰ وَلَا تَضَعُ إِلَّا بِعِلْمِهِ ۚ
وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ إِنَّا شُرَكَائِيَ قَالُوا أَدَّاتَكَ مَا مِتْنَا مِنْ مَّسْهَدٍ ﴿٤٧﴾

48. Waxaa ka dhumey waxay ahaayeen kuwo (baryo) caabuda horey, waxayna yaqiinsadeen inuusan u sugnaan gar-gaare.

وَصَلَّاهُمْ مَّا كَانُوا يَرْغَبُونَ مِنْ قَبْلُ ۖ وَظَنُّوْا
لَهُمْ مِنْ مَّجِيْبٍ ﴿٤٨﴾

Eebe wuxuu ku soo diraa Nabi walba Afka dadka uu ka dhexbixiyey Nabigana wuxuu Eebe ku soo diray Af Carabi isagoo Caalamka Dhamaan loo diray. mana haboona inafkale lagu diro, Quraankuna waa wanaagga ciddii rumeysa iyo xujada cidda diida, oo baadi ku fogaata, qisada Nabi Muusana wax badanbaa Quraanka lagu soo celceliyaa si loo eego arrintaas, wanaagu wuu ku anfici xumaantuna adi uunbey ku dhibi Eebana wax ma dulmo, wax walbana waa ogyahay. wixii ka soo hadhay oo la caabudona waa been aan waxkajirin. Fuṣṣilat (44-48).

49. Dadku kama daalo baryada khayr-ka, hadduu taabto sharra wuu quusasha badanyahay.

لَا يَشْعُرُ إِلَّا سِنًا ۚ مِنْ دُعَايِهِ الْحَمِيرُ وَإِنْ مَسَّهُ الشَّرُّ
فَيَعُوْسُ فَنُوطٌ ﴿٤٩﴾

50. Haddaan dhadhansiinno naxariis xagganaga ka timid dhib taabtay kadib, wuxuu dhahaa kan anaa iska leh mana u maleeynaayo inay Saacadda (qiyaame) kici, haddii layceliyo Eebahayna waxaan ku leeyahay agtiisa wanaag, dhab ahaan baan ugu warra-meynaa kuwii Gaaloobey waxay camal faleen, waxaana dhabahaan u dhadhansiinaynaa Cadaab daran.

وَلَيْنَ أَذْفَنُهُ رَحْمَةً مِّمَّا مِنْ بَعْدِ ضَرَاءَ مَسَّتْهُ
لِيَقُولَنَّ هَذَا لِىَ وَمَا أَظُنُّ السَّاعَةَ قَائِمَةً وَلَئِنْ
رُجِعْتُ إِلَىٰ رَبِّي إِنَّ لِي عِنْدَهُ لَلْحُسْبَىٰ ۚ فَلَنُتَبِّئَنَّ
الَّذِينَ كَفَرُوا بِمَا عَمِلُوا ۖ وَلَنُذِيقَنَّهُمْ مِنْ عَذَابٍ
غَلِيظٍ ﴿٥٠﴾

51. Markaan unicmeyno Dadka wuu jeedsadaa oo is dadbaa (daacadduu ka tagga) markuu taabto dhibna wuxuu soo baxaa isagoo baryo badan.

وَلَا ذَا أَعْمَتْنَا عَلَىٰ الْإِنْسَانِ أَعْرَضَ وَنَقِيبًا حِينِيهِ
وَلَا ذَا مَسَّهُ الشَّرُّ فُذُوْا دُعَايَ عَرِيْبٍ ﴿٥١﴾

52. Waxaad ku dhahdaa bal kawarrama hadduu Quraankani xaga Eebe ka yimid markaas aad ka Gaaloowdaan yaa ka baadi badan Ruux Gaalnimo iyo khilaaf fog ku sugan.

قُلْ أَرَأَيْتُمْ إِنْ كَانَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ نَزْلٌ مَقْرُونٌ
بِهِ مِنْ أَصْلٍ مِمَّنْ هُوَ مِنْ شِقَاقِي بَعِيدٍ ﴿٥٢﴾

53. Waxaanu ka tusin aayaadkanaga jahooyinka iyo Naftooda intey uga caddaato inuu Quraanku xaq yahay, miyuuna ku filleyn Eebe inuu waxkaste ogyahay.

سُرِّيهِمْ ءَايَاتِنَا فِي الْأَفَاقِ وَفِي أَنْفُسِهِمْ حَتَّى
يَتَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُ الْحَقُّ أَوَلَمْ يَكْفِ بِرَبِّكَ أَنَّهُ
عَلَى كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴿٥٣﴾

54. Waxayan Gaaladu kaga suganyihiin shaki lakulanka Eebe, Eebana waxkasta wuu koobay.

أَلَا إِنَّهُمْ فِي مَرِيقَةٍ مِنْ لِقَاءِ رَبِّهِمْ ءَلَا إِنَّهُمْ بِرَبِّكَلٍ
شَنِيءٍ وَمُحِيطٍ ﴿٥٤﴾

Baryada Eebe iyo rajeyntiisa yaa sharafleh oo fiican, mase haboona in waqtiga dhibkana labaryo waqtiga ladnaantana la halmaamo oo la inkiro lana Gaaloobo xaqana lagajecdsado, iyadoo la sheegan in wanaag u jiro Eebe agtiisa, mase aha saas, maxayse gaalo heli oo wanaag ah haday beeniyaan Quraanka xaqa ah ee Eebe xagiisa ka yimid, yaase ka Gaalnimo badan cidda saas fasha, xaqnimada Quraankana waxaa laga tusin Dadka Jahooyinka iyo Naftooda, waxaana maalin kasta soo bixi xaqnimada Quraanka iyo Islaamka, Eebaana marag ku filan ciddii shakida lakulankiisana way halaagsami illeen Eebe wax walba wuu koobaye. Fuṣṣilat (49-54).



Suurat Ash-Shuuraa

سُورَةُ الشُّورَى

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

1. Waxay ku tusin mucjisada Quraanka.

2. Sidoo kale.

3. Sida waxyiga laguugu soo dajiyey Nabiyoow yaa Nabiyadii horana loogu waxyooday, waxaana waxyooda Eebaha adkaada ee falka san.

4. Waxaa u sugnaaday waxa Samada iyo Dhulka ku sugan, Eebana waa sarreeyaha weyn.

5. Waxay u dhawdahay Samooyinku inay ku dildillaacaan korkooda, Malaa'igtuna waxay ku tasbiixsan mahad-da Eebahood, waxayna u dambidhaaf warsan kuwa dhulka ku sugan (Dadka) Eebana waa damibidhaafe Naxariista.

6. Kuwa yeeshay Eebe ka sokoow owliyo Eebe waa ogyahay korkooda (wuu daalacay) adiguna kama tihid wakii.

7. (Sidaan ugu waxyoonaay Nabiyadii hore) yaan adigana Nabiyoow kuugu waxyoonaay Quraan Carabi ah saad ugu digtid Ree Makaad iyo wax ka hareereeya (dadka kale) ugana digtid maalinta kulanka (Qiyaamada) shaki male Maalintaas, kooxi Jannay gali kooxna Jaxiimo.

8. Hadduu doono Eebe wuxuu ka yeeli lahaa dadka umad kaliya, laakiin wuxuu galiyaa cidduu doono naxariistiisa,

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

حَمْدٌ

عَسَقٌ

كَذَلِكَ نُوحِي إِلَيْكَ يَا أَلِيّ الْاَلِيّينَ مِنْ قَبْلِكَ اللَّهُ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ

لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَهُوَ الْعَلِيُّ الْعَظِيمُ

تَكَادُ السَّمَوَاتُ يَنْقَطِرْنَ مِنْ قَوْقِحِهِ وَأَمَلَتِكُمْ يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ وَسْتَغْفِرُونَ لِمَنْ فِي الْأَرْضِ إِلَّا إِنْ لَمْ يَكُنْ اللَّهُ هُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ

وَالَّذِينَ اتَّخَذُوا مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءَ اللَّهُ حَفِيفٌ عَلَيْهِمْ وَمَا أَنْتَ عَلَيْهِمْ بِوَكِيلٍ

وَكَذَلِكَ أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ قَوْلَنَا عَرَبِيًّا لِنُبَيِّنَ لِقَوْمٍ أَعْرَابٍ وَمَنْ حَوْلَهَا وَسُبْحَانَ رَبِّكَ رَبِّ الْعَالَمِينَ لَا رَيْبَ فِيهِ فَرِيقٌ فِي الْجَنَّةِ وَفَرِيقٌ فِي السَّعِيرِ

وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَعَلَهُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَكِنْ يَدْخُلُ مِنَ النَّاسِ فِي رَحْمَتِهِ وَالظَّالِمُونَ مَا لَهُمْ مِنْ وَلِيٍّ

daalimiintuna ma helaan sokeeye iyo
Gargaare midna.

وَلَا تَصْبِرِ ۝٨

Siduu Eebe ugu waxyooday Nabiyadii hore yuu ugu waxyooday Nabiga Muxamed ah (ammaan iyo Nabadgalyo karkiisa Eebe ha yeelee) Caa'isha waxay sheegtay inay aragtay Nabiga oo waxyi ku soo dagi Maalin Qabow oo haddana dhidid ka daadan wajigiisa, tan kale qudro iyo awood Eebaa iska leh, Samada iyo Mallaa'igtuna way waynaysaa, Quraankuna wuxuu u digi caalamka oo dhan, si uu wanaagga ugu hoggaamiyo, hadduu doono isagaa midayn kara Eebe. Ash-Shuuraa (1-8).

9. Mise waxay yeesheen Gaaladii Eebe ka sokow awliyo (ay caabudaan) Eebe umbaa wali ah, isagaana nooleeya wixii dhintay, isagaana wax walba kara.

أَمْ أَخَذْنَا مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءَ ۗ قَالَ اللَّهُ هُوَ الْوَلِيُّ وَهُوَ يُحْيِي الْمَوْتِ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ۝٩

10. Waxaad isku khilaaftaan oo shay ah Eebaa leh xukunkiisa (loo celin), kaasi-na waa Eebaha i barbaariya, isagaana tala saartaa, xaggiisaana u noqon.

وَمَا اخْتَلَفْتُمْ فِيهِ مِنْ شَيْءٍ فَحُكْمُهُ إِلَى اللَّهِ ۗ ذَلِكُمْ اللَّهُ رَبِّي عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ أُنِيبُ ۝١٠

11. Isagaa abuuray Samooyinka iyo dhulka idiinkana yeelay naftiinna noocyo (Lab iyo Dhaddig) xoolahana idiinka yeelay Noocyo, wuuna idin abuuraa, wax la mid ahna ma jiro, waana maqle arka.

فَأَطْرَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ جَعَلَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا وَمِنَ الْأَنْعَامِ أَزْوَاجًا يَذُرُّكُمْ فِيهَا لَيْسَ كَمِثْلِهِ شَيْءٌ ۗ وَهُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ ۝١١

12. Isagaa iska leh xukunka Samooyinka iyo Dulka, wuuna u fidiyaa Rizqiga ruuxuu doono, wuxuuna ku cidhiid-hyaa Cidduu doono, wax walbana waa ogyahay.

لَهُ مَقَالِيدُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ ۗ يَسُطُّ الرِّزْقَ لِمَن يَشَاءُ وَيَقْدِرُ إِنَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ۝١٢

13. Wuxuuna idiin jideeyey xagga Diinta wuxuu u dardaarmay (Nabi) Nuux iyo kaan kuu Waxyoonnay adiga iyo waxaan u dardaarannay (Nabi) Ibraahiim (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Ciise inay oogaan Diinta, aydaan kuna kala tagin dhexdiisa, waxaa ku waynaaday Gaalada waxaad ugu yeedhi, Eebaa u doorta xaggiisa Cidduu doono una hanuuniya xaggiisa cidduu hanuunin.

۞ سَخَّرَ لَكُمْ مِنَ الدِّينِ مَا وَّصَىٰ بِهِ وَحَا وَأَلَّذِي أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ وَمَا وَصَّيْنَا بِهِ ۗ إِنَّا نُرِيدُكُمْ وَمُؤْمِنِي وَعِبَادِي أَنْ يَفْهَمُوا الَّذِينَ وَلَا تَسْتَفْهَمُوا فِيهِ كَبُرَ عَلَى الْمُشْرِكِينَ مَا تَدْعُوهُمْ إِلَيْهِ ۗ اللَّهُ يَجْتَبِي إِلَيْهِ مَن يَشَاءُ وَيَهْدِي إِلَيْهِ مَن يُنِيبُ ۝١٣

14. Mana kala tagin markuu u yimid cilmigu ka dib mooyee, dulmi iyo xasad dartiis, haddayna jirin kalimo Eebahaa

وَمَا تَنْفَرُوا إِلَّا مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَهُمُ الْوَعْدُ بِغَيَابَتِهِمْ ۗ وَلَوْلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتْ مِنْ رَبِّكَ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى

ka hormatay oo tan iyo muddo maga-caaban (in la sugo) waxaa la kala xukmin lahaa dhexdooda, kuwii ga-daashood la dhaxalsiiyey Kitaabka waxay ku suganyihiin shaki daran.

لَقَضَىٰ بَيْنَهُمْ وَأَنَّ الَّذِينَ أَوْرَثُوا الْكُتُبَ مِنْ
عَدِهِمْ لَفِي شَكٍّ مِنْهُ لَمَرِيبٍ ﴿١٤﴾

Eebaa wali u ah Mu'miniinta, wax walbana kara, wixii laysku khilaafana loo celin, lana tala saartaa, loona noqdaa, Samadana abuuray, noocyana idinka abuuray, wax la midana jirin, xukunka Samada iyo Dhulkana iska leh. Rizqigana waasiya ama cidhiidhya, inoona jideyey diin xaq ah oo ah tii Nabiyadii hore la faray oo kale, oo ah in diinta si fiican loogu dhaqmo oon lagu kala tagin, Gaalase way diidday xaqii xasad dartiis, wayna kala tageen Eebe umbaase awood leh. Ash-Shuura (9-14).

15. Waxaas dartiis ugu yeedh Dadka, u toosnawna sidii lafu faray, hana raacin hawadooda, waxaadna dhahdaa waxaan rumeeyey waxa Eebe soo dajiyey oo Kitaab ah, waxaana lay faray inaan u caddaalo falo dhexdiina, Eebana waa Rabbiganno iyo Rabbigiin, waxaa noo sugnaaday waxaan camal fallo, idinkana waxaa idiin sugnaaday waxaad camal fashaan, doodina inama dhextaallo, Eebaa kulmin dhexdeenna, xaggiisaana loo ahaan.

فَلِذَلِكَ فَانْرُكَّ وَأَمْتَصَفَ كَمَا أَمَرْتُ وَلَا تَتَّبِعْ
أَهْوَاءَهُمْ وَقُلْ ءَأَمِنْتُ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ مِنْ
كِتَابٍ وَأَمَرْتُ لِأَعْدِلَ بَيْنَكُمْ اللَّهُ رَبَّنَا
وَرَبُّكُمْ لَنَا أَعْمَلْنَا وَأَكْمَرُ أَعْمَلَكُمْ لِأَحْجَبَ
بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ اللَّهُ يَجْمَعُ بَيْنَنَا وَاللَّهُ
الْمَصِيرُ ﴿١٥﴾

16. Kuwa ku doodaya Eebe inta la ajiibay kadib xujadoodu waa baadil Eebe agtiisa, korkoodana cadahaa ah, waxaana u sugnaaday Cadaab daran.

وَالَّذِينَ يُحَاجُّونَ فِي اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مَا اسْتُجِيبَ لَهُ
حُجَّتُهُمْ دَاحِضَةٌ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَعَلَيْهِمْ عَذَابٌ
وَلَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ ﴿١٦﴾

17. Eebe waa kan u dajiyey Kitaabka si xaq ah iyo miisaan, (caddaalada) mana ogid waxay mudantahay in saacadda (Qiyaame) dhawdahay.

اللَّهُ الَّذِي أَنْزَلَ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ وَالْمِيزَانَ
وَمَا يَذَرُكَ لَعَلَّ السَّاعَةَ قَرِيبٌ ﴿١٧﴾

18. Waxaa dadajista saacadda kuwaan rumeynin iyada, kuwa rumeeyayna way ka cabsadaan xaggeeda, waxayna ogyihiin inay xaq tahay, kuwa ku murmi saacaddana waxay ku suganyihiin baadi cad.

يَسْتَعْجِلُ بِهَا الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِهَا وَالَّذِينَ
ءَامَنُوا مُسْفِهُونَ مِنْهَا وَعَلِمُونَ أَنَّهَا الْحَقُّ
أَلَا إِنَّ الَّذِينَ يُمَارُونَ فِي السَّاعَةِ لَفِي ضَلَالٍ
بَعِيدٍ ﴿١٨﴾

Aayadda hore waxay kulmisatay toban eray oo mid walba kan kale ka gaar yahay oo wada amar iyo reebid iyo toosin ah, waxaana la mid ah aayatulkursi, waxaana ka mid ah waxyaalaha u waaweyn: Eebo Dadka loogu yeedho, in la toosnaado, inaan hawada Gaalada la raacin, in Dadka caddaalad lagu maamulo in la ogaado in Eebe Ilaah u yahay Dadkoo dhan, inaan wax qarsoon jirin diinta Islaamka ah,

in cid walba camalkeeda ma'suul ka tahay, in Eebe loo noqon. Bal day weynanka aayadda, tan kale Eeboo lagu doodo inta xaqu caddaaday waa wax kama jiraan iyo ciqaab Eebe, illeen Eebaa soo dajiyey Quraan iyo caddaaladda, Qiyaamadu goortay dhicina oge, waana doqonnimo iyo baadinimo in la soo dedejisto, waxaase habboon in laga cabsado loona darbado sida Mu'miniinta, shakigeeduna waa baadi fog. Ash-Shuura (15-18).

19. Eebe waa u naxariisbadanaha ad-doomadiisa wuxuuna arzuqaa cidduu doono, waana xoogbadane adkaade ah.

اللَّهُ لَطِيفٌ بِعِبَادِهِ يَرْزُقُ مَنْ يَشَاءُ وَهُوَ
الْقَوِيُّ الْعَزِيزُ ﴿١٩﴾

20. Ruuxii dooni camalka aakhiro waan u siyadinnaa camalkiisa, Ruuxiise ah mid dooni camal adduunyo waan ka siinnaa xaggeeda, kumana leh aakhiro wax nasiib ah.

مَنْ كَانَ يُرِيدُ حَرْثَ الْآخِرَةِ نَزِدْ لَهُ فِي حَرْثِهِ
وَمَنْ كَانَ يُرِيدُ حَرْثَ الدُّنْيَا نُؤْتِهِ مِنْهَا وَمَا لَهُ
فِي الْآخِرَةِ مِنْ نَصِيبٍ ﴿٢٠﴾

21. Mise waxay leeyihiin Gaaladu shurako Eebe oo u Jideeyey diin iyo (xukun) aan Eebe idmin haddayna jirin kalimadda kala bixinta (qiyaamada) waa la kala xukumi lahaa dhexdooda, daalimiintana waxaa u sugnaaday ca-daab daran.

أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا
لَمْ يَأْتِنُ بِهِ اللَّهُ وَلَوْلَا كَلِمَةُ الْفَصْلِ لَفُضِيَ
بَيْنَهُمْ وَإِنَّ الظَّالِمِينَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٢١﴾

22. Waxaad arkeysaa daalimiinta oo ka cabsan waxay kasbadeen, wuuna ku dhici korkooda, kuwa rumeeyey xaqse oo camal fiican falay waxay gali Beero Janno, waxayna ku leeyihiin waxay doonaan Eebe agtiisa, taasina waa fadli weyn.

تَرَى الظَّالِمِينَ مُسْفِقِينَ مِمَّا كَسَبُوا
وَهُوَ وَاقِعٌ بِهِمْ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا
الصَّالِحَاتِ فِي رَوْضَاتِ الْجَنَّاتِ لَهُمْ مَا
يَشَاءُونَ عِنْدَ رَبِّهِمْ ذَلِكَ هُوَ الْفَضْلُ
الْكَبِيرُ ﴿٢٢﴾

Xadiith waxaa ah, ugu bishaaree ummaddan sharaf, sareyn iyo gargaar iyo Dhulkoo la makaniyo, ruuxii camal aakhiro u fala adduunyo darteed aakhiro kuma laha nasiib, Eebana waa naxariiste, cid walbana waxay mudan waxay camal fashay, waxaan diin ahayn oon Eebe idminna ciddii diin iyo sharci ka dhigata iyo tan ku raacdaba waa cid halaagsantay oo daalim ah, cadaabna u sugnaaday, qiyaamadana ka cabsan waxayfaleen iyo waxa ku dhici, Mu'miniintuna waxay gali Beer Janne, waxayna ka heli Eebe agtiisa waxay doonaan, waana fadli weyn. Ash-Shuura (19-22).

23. kaasi waa midka uu ugu bishaareyn Eebe addoomihiisa ah kuwa rumeeyey (xaqa), camal fiicanna falay, waxaadna dhahdaa: Nabiyoow maydin warsanaayo ujuuro xaqa gaadhsiintiisa oon ahayn jacayl qaraabannimo, ruuxii kas-

ذَلِكَ الَّذِي يُبَشِّرُ اللَّهُ عِبَادَهُ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا
الصَّالِحَاتِ قُلْ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِلَّا الْمَوَدَّةَ فِي
الْقُرْبَىٰ وَمَنْ يَقْرَبْ حَسَنَةً نَّزِدْ لَهُ فِيهَا حَسَنًا
إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ شَكُورٌ ﴿٢٣﴾

bada Wanaagna waxaannu u siyaadin wanaag, Eebana waa dambidhaafe mahdiyo.

24. mise waxay dhihi wuxuu ku been abuurtay Eebe, hadduu doono Eebe wuxuu dabooli lahaa qalbigaaga, wuxuuna tiraa Eebe xumaanta, xaqana wuxuu ku sugaa kalimadiisa (quraanka) Eebana waa ogyahay waxa laabta kusugan.

25. Eebana waa kan aqbala toobada addoomadiisa, kana dhaafa xumaanta oga Waxaad falaysaan.

26. Ee (Eebana) wuxuu ajiibaa kuwa rumeeyey xaqa oo camal fiican falay wuxuuna u siyaadiyaa fadligiisa, gaalana waxaa u sugnaaday cadaab daran.

Eebe wax badan buu u bishaareeyey addoomadiisa suuban. Diinta iyo xaqa gaadhsiintiisna ma aha wax ujuuro lagu xidho, ciddii wanaag fashana Eebe waa usiyaadiyaa, Quraankuna waa xaq Eebe ka soo dagay, mana aha wax Nabigu iskala yimid siday gaaladu sheegeen, Eebana waa toobad aqbale, xumaan astura ah, oo ajiiba maqlana Mu'miniinta. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Eebe waa uga farax badanyahay toobadda addonkiisa Ruux gaadiidki uu sahayda ku watay meel cid, la ah kaga luntay, markaas seexday markuu ka quustay, kadibna arkay Gaadiidkiisii. oo agtaagan oo markaas qabtay Faruur xidhkeedii.

Waxaa wariyey Muslim. Ash-Shuura (23-26).

27. Hadduu Eebe u fidiyo (waasiciyo) rizqiga addoomadiisa waxay ku kibri lahaayeen dhulka wuxuuse u soodajin qadarkuu doono, Eebana addoomadiisa wuu ogyahay oo arkaa.

28. Eebana waa kan soo dajiya Roobka intay quustaan kadib fidiyana naxariis-tiisa, waana Eebaha waliga ah (gargaare) ee la mahdiyo.

29. Calaamooyinkiisa waxaa ka mid ah Abuuridda Samooyinka iyo Dhulka iyo wuxuu ku fidiyay (ku abuuray) dhexdooda oo socda, Eebana inuu soo kulmiyo dhammaantood markuu doono wuu karaa.

أَمْ يَقُولُونَ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا فَإِنْ يَشَأِ اللَّهُ يَخْتِمْ عَلَى قَلْبِكَ وَيَمْحُ اللَّهُ الْبَاطِلَ وَيُخَوِّدُ الْحَقَّ يَوْمَ تَكْتُمُنَّهُ إِنَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿٢٤﴾

وَهُوَ الَّذِي يَقْبَلُ التَّوْبَةَ عَنْ عِبَادِهِ وَيَعْتَفُوا عَنْ السَّيِّئَاتِ وَيَعْلَمُ مَا تَعْمَلُونَ ﴿٢٥﴾

وَيَسْتَجِيبُ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَيَزِيدُهُمْ مِنْ فَضْلِهِ ۗ وَالْكَافِرُونَ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ ﴿٢٦﴾

﴿ وَلَوْ بَسَطَ اللَّهُ الرِّزْقَ لِعِبَادِهِ لَبَغَوْا فِي الْأَرْضِ وَلَٰكِن يُنزِلُ بِقَدَرٍ مَّا يَشَاءُ ۗ إِنَّهُ بِعِبَادِهِ خَبِيرٌ بَصِيرٌ ﴿٢٧﴾

وَهُوَ الَّذِي يُنزِلُ الْغَيْثَ مِنْ بَعْدِ مَا قَطَطُوا وَيَنْشُرُ رَحْمَتَهُ ۗ وَهُوَ الْوَلِيُّ الْمُحْسِنُ ﴿٢٨﴾

وَمِنْ آيَاتِهِ خَلْقُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا ۗ إِنَّ دَابَّةَ وَهُوَ عَلَىٰ جَمْعِهِمْ إِذَا يَشَاءُ قَدِيرٌ ﴿٢٩﴾

30. Wixii idinku dhaca oo musiiba ah (dhib ah) waa waxay kasbadeen Gac-mihiinnu, wuxuuna idinka cafiyaa (Eebe) wax badan.

وَمَا أَصَابَكُمْ مِنْ مُصِيبَةٍ فَمَا كَسَبَتْ أَيْدِيكُمْ وَيَعْفُوا عَنْ كَثِيرٍ ﴿٣٠﴾

31. Mana tihidin kuwo Eebe ku daaliya dhulka dhexdiisa, idiimana sugnaanin isaga ka sokoow Wali iyo Gargaare midna.

وَمَا أَنْتُمْ بِمُعْجِزِينَ فِي الْأَرْضِ وَمَا لَكُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿٣١﴾

Dadka dabecadiisa waxaa ka mid ah in markuu ladanyahay uu kibro islana waynaado marka laga reebo kuwa wanaagsan ee dhab ur umeeey xaqa.

Qataadana wuxuu yidhi: waxaa la dhihi jiray nolol waxaa ufiican taan kuna shuqlinin kuna kibrinin. Hasa ahaatee xigmadda Eebe waxay keentay in cid walba loo Arzuqo sida Eeba doono illeen isagaa wax walba oge, addoomadiisana yaqaanee.

Roobkana Eebaa keena qusasho kadib, Cirka, dhulka iyo waxa ku dhexnoolla Eebaa abuuray, karana inuu soo kulmiyo Qiyaamada markuu doono, wixii dhib ah oo Dadka ku dhacana waa waxay isu sababeen ooy kasbadeen, waxbadanna Eebaaba ka cafiya, waxdaaliya ama cajiis galiyana ma jiro gargaare aan isaga ahayna ma jiro Daxaak wuxuu yidhi: Ma ogin Ruux xifdiyey Quraanka oo halmaamay dambimooyee wuxuuna yidhi masiibadee ka wayn halmaanka Quraanka.

Ash-Shuura (27-31).

32. Calaamooyinka Eebe waxaa ka mid ah Maraakiibta (socota) Badda iyadood mooddo buuro.

وَمِنْ آيَاتِهِ الْجَوَارِ فِي الْبَحْرِ كَالْأَعْلَامِ ﴿٣٢﴾

33. Hadduu doono (Eebe) wuxuu xasiliyaa (joojiyaa) Dabaysha markaasay fadhiistaan Biyaha korkooda, taasina waxaa ugu sugan calaamo ruux kastoo samir iyo mahad badan.

إِنْ يَسْأَلُ سِوَى الرِّيحِ فَيَظَلَّنْ رَوَاكِدَ عَلَى ظَهْرِهِ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿٣٣﴾

34. Hadduu doonana (Eebe) wuu ha-laagaa Doomaha waxay kasbadeen darteed, wax badanna wuu ka cafiyaa.

أَوْ يُوقِنَ هُنَّ يَمَّا كَسَبُوا وَيَعْفُ عَنْ كَثِيرٍ ﴿٣٤﴾

35. Waxayna ogaan kuwa ku murmi aayaadkanaga inuusan u sugnaanin meeley magan galaan.

وَيَعْلَمُ الَّذِينَ يُجَادِلُونَ فِي آيَاتِنَا مَا لَهُمْ مِنْ حِصْحٍ ﴿٣٥﴾

36. Wixii laydin siiyo oo wax ah waa uun nolasha dhaw raaxadeeda, waxa Eebe agtiisa ah yaase u khayrbadan una hadhid badan kuwa rumeeyey (xaqa) Eebhoodna tala saarta.

فَمَا أُوتِيتُمْ مِنْ شَيْءٍ فَمَتَّعِ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا وَمَا عِنْدَ اللَّهِ خَيْرٌ وَأَبْغَى لِلَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٣٦﴾

oo halaagaa ama dhaqaaqa u diidaa xumaantooda darteed, illeen wuu ogyahay wax walbee, kamana qarsoona kuwa ugu murma aayaadkiisa madax adayg wax gargaare ahna ma helaan markuu ciqaabo, adduunyaduna wax loo leexo oo loo go'o ma aha illeen waxa Eebe agtiisa ah oo wanaag ah iyo tala saarashadiisa yaa u khayr badan kuwa xaqa rumeeyey. Ash-Shuura (32-36).

37. kuwaasi waa kuwa ka fogaada dambiga waaweyn iyo xumaanta, markey cadhoodaanna u Cafiya (u dhaafa).

وَالَّذِينَ يَحْتَبُونَ كَيْدَ الْإِنَّمِ وَالْفُؤْحِشِ وَإِذَا مَا
عَضِبُوا لَهُمْ يَغْفِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Waana kuwa ajiibay (maqlay) Eebahood oogayna Salaadda amarkooduna tashi yahay dhexdooda waxaan ku arzaaqaayna wax ka bixiya.

وَالَّذِينَ اسْتَجَابُوا لِرَبِّهِمْ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَأَمْرُهُمْ شُورَى
بَيْنَهُمْ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣٨﴾

39. Waana kuwa marka gardarro (iyo dulmi) ku dhaco gargaarta (iska celiya).

وَالَّذِينَ إِذَا أَصَابَهُمُ الْبَغْيُ هُمْ يَنْصَرُونَ ﴿٣٩﴾

40. Xumaan abaalkeeduna waa ku abaal marin mid lamid ah, Ruuxiise iska cafiya oo wanaajiya ajrigiisa Eebaa siin, Eebana ma jecla daalimiinta.

وَجَزَاءُ سَيِّئَةٍ سَيِّئَةٌ مِثْلُهَا فَمَنْ عَفَا وَأَصْلَحَ
 فَأَجْرُهُ عَلَى اللَّهِ إِنَّهُ لَا يُحِبُّ الظَّالِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. Ruuxii gargaarta inta la dulmiyey ka dib kuwaas korkooda wax ma saarro (jid lagumaleh).

وَلَمَنْ أَنْصَرَ بَعْدَ ظُلْمِهِ فَأُولَئِكَ مَا عَلَيْهِمْ مِنْ
سَبِيلٍ ﴿٤١﴾

42. Waxaase dhib saaran yahay uun (jid laguleeyahay) kuwa dulmiya Dadka kuna kibra Dhulka xaq darro, kuwaas waxaa u sugnaaday cadaab daran.

إِنَّمَا السَّبِيلُ عَلَى الَّذِينَ يَظْلُمُونَ النَّاسَ وَيَبْغُونَ فِي
الْأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ أُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٤٢﴾

43. Ruuxii samra oo iska cafiya taasi waa arrin loo qasdo (la jecelyahay).

وَلَمَنْ صَبَرَ وَعَفَا إِنَّ ذَلِكَ لَمِنْ عَزْمِ الْأُمُورِ ﴿٤٣﴾

Xukunka Muslimiintu waa wada tashi, iskaalmeyn iyo isjacayl, saasayna fari diinta islaamku, maxaa yeelay waxay dhab u rumeeyeen Eebe iyo sharcigiisa, Salaaddana way oogeen, wayna is taakuleeyaan, xumaantana way ka indho laabaan, dulmi iyo gardarro iyo isla weynina agtooda ma taalo, ciddiise dulmida oo ku xadgudubta way ujawaabaan, hadday cafiyaanna way fiicantahay, illeen ciddii dulmi badan unbaa qalloocan oo jid daran.

Nabiguna wuxuu yidhi: (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelee) Labada is cayda waxay, dhahaanba midka billaabay (yaa xumaanta leh) hadduusan xad gudbin kan la dulmiyey. waxaa kaloo sugnaatay in Nabigu yidhi Saamaxaadda Ruuxa wuxuu Eebe ugu siyaadiyaa sharaf. Ash-Shuura (37-43).

44. Ruuxii Eebe dhumiyo ma helo sokeeye gadaashiis, waxaadna arkeysaa daalimiintu markey arkaan cadaabka

وَمَنْ يُضِلِلْ اللَّهُ فَمَا لَهُ مَهْلِكٌ مِنْ بَعْدِهِ وَوَسَّرَى
الظَّالِمِينَ لِمَارَاتِهِمْ وَالْعَذَابُ يُقَالُونَ هَلْ إِلَىٰ مَرَدٍّ

سَيِّئًا ٤٤

iyagoo leh ma suuroobi karaa waddo (hab) loogu noqdo adduunkii.

45. Waxaadna arkeysaa iyagoo loo bandhigi Naarta, oo la khushuucsan dulli, kana dayi wax si Qarsoon, waxayna dhaheen kuwii rumeeyey (xaqa) kuwa khasaaray waa kuwa khasariyey naftooda iyo ehelkooda Maalinta Qiyaame, daalimiintuna waxay gali cadaab jogta ah.

وَتَرَكْنَهُمْ يُعْرَضُونَ عَلَيْهَا خَشِيعَاتٍ مِنَ الذُّلِّ
يَنْظُرُونَ مِنْ ظُرُفٍ خَفِيٍّ وَقَالَ الَّذِينَ ءَامَنُوا
إِنَّ الْخٰسِرِينَ الَّذِينَ خَسِرُوا أَنفُسَهُمْ وَأَهْلِيَهُمْ
يَوْمَ الْقِيٰمَةِ ۗ أَلَا الظَّٰلِمِينَ فِي عَذَابٍ مُّبِينٍ ٤٥

46. Umana sugnaan awliyo (sokeeye) ugargaara Eebe ka sokoow ruux Eebe qaddaray dhumiddisana jid uma sugnaanin (uu ku tooso).

وَمَا كَانَ لَهُمْ مِنْ أَوْلِيَاءَ يَنْصُرُوهُمْ مِنْ دُونِ
اللَّهِ ۗ وَمَنْ يُضِلِلِ اللَّهُ فَهُوَ مُضِلٌّ ۗ وَسَيِّئٌ ٤٦

47. Ajiiba (maqla) Eebihiin ka hor imaatin maalin aan laga celinkarin Eebe, idiinmana sugnaanayo wax la magangalo, Maalintaas, idiinmana sugna inkiraad (danbigoodii).

أَسْتَجِيبُوا لِرَبِّكُمْ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَ يَوْمٌ لَا مَرَدَّ لَهُ
مِنَ اللَّهِ مَا لَكُمْ مِنْ مَلْجَأٍ يَوْمَئِذٍ وَمَا لَكُمْ
مِنْ نٰكِبٍ ٤٧

48. Hadday jeedsadaan kuuma aannaan dirin inaad ilaaliso korkooda, korkaaga ma aha waxaan gaadhsiiin ahayn, marka dhadhansiinno Dadkana naxariis way farxaan «si kibir ah», hadday ku dhacdo xumaan waxay Gacmahoodu hor marsadeen darteed dadkii aad buu u Gaalooaba.

فَإِنِ اعْرَضُوا فَمَا أَرْسَلْنَاكَ عَلَيْهِمْ حَفِيظًا
إِنِ عَلَيْكَ إِلَّا الْبَلَاغُ ۗ وَإِنَّا إِذَا أَفْتَنَّا الْإِنْسَانَ مِمَّا
رَحِمْنَا فَرِحَ بِهَا ۗ وَإِن تُصِيبْهُمْ سَيِّئَةٌ يَمَافَدَمَتْ
أَيْدِيَهُمْ فَإِنِ الْإِنْسَانُ كَفُورٌ ٤٨

Awoodda Eebaa leh ciddii hanuun ka doontana wuu toosiyaa, kii dhumana wuu halaagi, daalimiintuna waxay la kulmi Qiyaamada dulli iyo cadaab daran, iyo khaasare dhab ah, gargaarnaa ma helaan Eebe ka soo hadhay, waase in Eebe la maqlo Qiyaame ka hor, illeen wax celin iyo gargaare midna ma jiree, Nabiga waxaa uun saaran gaadhsiiin, mase aha ilaaliye iyo qasbe, had iyo jeerna khayr iyo sharba waa in Eebe la aqoonsado, loona hoggaansamo. Ash-Shuura (44-48).

49. Eebaa iska leh xukunka Samooyinka iyo Dhulka, wuxuuna abuuraa wuxuu doono, wuxuu siiyaa cidduu doono gabdho, cidna wuxuu siiyaa Wiilal.

لِلَّهِ مَلِكُ السَّمٰوٰتِ وَالْاَرْضِ ۗ يَخْلُقُ مَا يَشَآءُ ۗ يَهَبُ
لِمَنْ يَشَآءُ اِنْتًا وَيَهَبُ لِمَنْ يَشَآءُ الذُّكُوْرَ ٤٩

50. Ama wuu isku lammaaneeyaa Wiilal iyo Gabdho, ruuxuu doonana wuxuu

اَوْ يُزَوِّجُهُمْ ذُكْرٰنًا وَاُنثٰنًا وَيَجْعَلُ مَنْ يَشَآءُ

ka yeelaa Madhale Eebaana wax og, karana.

عَقِيمًا إِنَّهُ وَعَلِيمٌ قَدِيرٌ ﴿٥١﴾

51. Uma suurawdo Dad inuu Eebe la hadlo waxyi mooyee, ama kala hadlo xijaab gadaashiis, ama uu u soo diro farriin (Malag), oo markaas ugu waxyooda idamka Eebe wuxuu doono, Eebana waa sarreeye falsan.

﴿٥١﴾ وَمَا كَانَ لِنَبِيٍّ أَنْ يَكْتُمَ اللَّهُ إِلَا وَحْيًا أَوْ يَتْلُوَ مَا يُوحَىٰ بِيَدَيْهِ ۗ عَلَيْهِ حَكِيمٌ ﴿٥١﴾


52. Saasaannu kuugu waxyoonnay nolol amarkannaga ah (Quraanka) maadan aqoonnin Kitaab wuxuu yahay iyo Iimaan midna, laakiin waxaan ka yeelay Nuur aannu ku hanuuninno cid-daan doonno oo addoomadannada ka mid ah, adiguna Nabiyoow waxaad ku hanuunin jidka toosan.

وَكَذَلِكَ أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ رُوحًا مِنْ أَمْرِنَا مَا كُنْتَ تَدْرِي مَا أَلِكْتُبُ وَلَا أَلْقِيَنَّ وَلَكِنْ جَعَلْنَاهُ نُورًا نَهْدِي بِهِ مَنْ نَشَاءُ مِنْ عِبَادِنَا وَإِنَّكَ لَمَهْدِي إِلَىٰ صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٥٢﴾

53. Jidka Eebaha iska leh xukunka waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, xagga Eebeyna u ahaan umuuru-hu.

صِرَاطَ اللَّهِ الَّذِي لَهُ مَا فِي السَّمٰوٰتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ ۗ أَلَا إِلَى اللَّهِ تَصِيرُ الْأُمُورُ ﴿٥٣﴾

Awoodda cirka iyo Dhulka Eebaa iska leh, sida aayado badan Sheegeen, wuxuu rabo yuuna abuuraa, labada ruux ee isqabtana hadduu doono gabdhuu ka beeraa ama Wiilal, ama labadaba, hadduu doonana madhalayaal buu ka dhigaa, taasina waxay muujin inayan labada isqabta midna masuul ka ahayn gabadh ahaanshaha ilmaha ama Wiil noqoshadiisa. Eebana wax walba waa ogyahay waana karaa, isagaana og maslaxada iyo Ilmaha uu rabo inuu adduunka u soo bixiyo, Nabiyadiina isagaa u waxyooday siduu Nabiga Muxamed ah (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelec) ugu waxyooday nolal uusan aqoonnin hadda ka hor, Eebaase ku hanuuniya addoommadiisa jidka toosan cidduu doono, illeen isagaa wax walba hantiya xaggiisana loo celin umuuraha. Ash-Shuura (49-53).



Suurat Az-Zukhruf

سُورَةُ الزُّكْرُفِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Mucjisada Quraankay ku tusin.
2. Waxaan ku dhaartay Kitaabka (Quraanka) cade (muuqda) ee.
3. annagaa ka yeelley Quraan Carabi ku soo dagay, inaad kastaan darteed.
4. Wuxuuna ku sugan yahay Kitaabka asalkiisa (Looxul maxfuudka) annaga agteenna, waana sarreeyaa Quraanku xigmadina ku dhan tahay.
5. Ma waxaan Quraanka idiinka hay-sanaynaa (daysanaynaa) inaad tihiin qoom ku xadgudbay xumaanta.
6. Badanaa intaan u dirray Nabi kuwii hore.
7. Nabi uma yimaado Gaaladii haddii kale way ku jees jeesi jireen.
8. Waxaana halaagnay kuwo ka xoog-badan qabasho waxaana tagay (hor maray) tusaalihii kuwii horreeyey (ee halaagga ahaa).

Quraanka Eebaa soo dajiyey isagoo carabi ah, sharafna leh looxul-maxfuudkana ku qoran, Eebena uma daayo waxyiiga iyo xaqa beenin darteed, maxaa yeelay ummadihii horaba wax badan baa loo diray Nabiyo u diga ayna ku jees jeesi jireen, Eebana waxbadan oo ka mid ah yuu halaagay kuwaasoo ka xoogbadnaa gaaladii ree Makaad. Qataade wuxuu yidhi: Eebaan ku dhaartee haddii la koryeelo Quraankan markey diideen kuwii horreeyey ee umaddan way halaagsami lahaayeen, hase yeeshee Eebe sarreeye wuu ku celceliyey wuuna u naxariistay, wuxuuna ugu yeedhay Ilaa labaan sano iyo intii Eebe doono. Az-Zukhruf (1-8).

9. Haddaad warsato Gaalada yaa abuuray Samooyinka iyo dhulka waxay

حَمْدٌ

وَأَلَكِتَابِ الْمُبِينِ ١

إِنَّا جَعَلْنَاهُ قُرْءَانًا عَرَبِيًّا لَعَلَّكُمْ

تَعْقِلُونَ ٢

وَلَنذَرُكُمْ أُمَّرَ الْكِتَابِ لَدَيْنَا لَعَلَّكُمْ

تَحْكُمُونَ ٣

أَفَضْرَبُ عَنْكُمْ الذِّكْرَ صَفْحًا أَنْ كُنْتُمْ

قَوْمًا مُشْرِفِينَ ٤

وَكُلُّ أَرْسَلْنَا مِنْ نَبِيِّ فِي الْأَوَّلِينَ ٥

وَمَا يَأْتِيهِمْ مِنْ نَبِيٍّ إِلَّا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِئُونَ ٦

فَأَهْلَكْنَا أَشَدَّ مِنْهُمْ بَطْشًا وَمَضَى مَثَلُ

الْأَوَّلِينَ ٧

وَلَيْنَ سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ

odhan waxaa abuuray Eebaha adkaada ee wax walba og.

يَتَقَوَّنُ خَلْقَهُنَّ الْعَزِيزُ الْعَلِيمُ ﴿١٠﴾

10. Waana Eebaha idiin ka yeeley dhulka gogol, idiinkana yeeley dhexdiisa Waddooyin si aad ugu hanuuntaan (toostaan).

الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ مَهْدًا وَجَعَلَ لَكُمْ فِيهَا سُبُلًا لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١١﴾

11. Waana Eebaha ka soo dajiyey Samada Biyo qadaran oon ku noolayno Magaalo dhimatay, saasaana leydiin soo bixin.

وَالَّذِي نَزَّلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً يَقْدِرُ فَأَنْشَرْنَا بِهِ بَلْدَةً مَيْتًا كَذَلِكَ نُخْرِجُونَ ﴿١٢﴾

12. Waana Eebaha abuuray noocyada dhammaantood idiinkana yeeley Maraakiibta iyo Xoolaha waxaad kortaan.

وَالَّذِي خَلَقَ الْأَزْوَاجَ كُلَّهَا وَجَعَلَ لَكُمُ مِنَ الْفَلَاحِ وَالْأَنْعَامِ مَا تَرْكَبُونَ ﴿١٣﴾

13. Inaad ku ekaataan dhabarkeeda markaas aad xusuusataan Nicmada Eebihiin markaad ku ekaataan ood dhahdaan waxaa nasahan Eebaha noosahley tan mana nihin kuwo kara leyliigeeda.

لِيَسْتَوُوا عَلَى ظُهُورِهِمْ تُوَدِّعُونَ رِجْلَهُمْ وَإِذَا أَسْتَوُوا يَسْتَوِي عَلَيْهِمْ وَتَقُولُوا سِحْرٌ بَدِيعٌ أَمْ سَمَاءُ مَائِدَةٍ مَقْرِينٍ ﴿١٤﴾

14. Anaguna xagga Eebahanno yaannu u gaddoomeynaa.

وَمَا نَأْتِيهِمْ لَيْلٌ مِنَ اللَّيْلِ وَنَوْمُهُمْ لِيَلْزَمَهُمُ الْعَنَقَابُ ثَوْتًا ثُمَّ يُنَادُوا بِرَبِّهِمْ ﴿١٥﴾

Ciddii caqli leh oon dan gaara lahayn waxay qiri jiridda iyo awoodda Eebe, Illeen isagaa abuuray Cirka, Dhulka iyo wax kastaba.

Gaaladii Ree Makaadna saasay qirsanaayeen in kastooy Caabudi jireen Eebe wax kasoohadhay, waxaase Caabudid dhabah mudan Eebaha Dhulka goglay, Wadooyinkana ka bixiyay, Cirkana Biyo ka keenay, iyagoo qaddaran oo qiyaasan si loogu noolceeyo dhul abaarobay iyo wax dhibaataysan. waana Eebaha sahlay Maraakiibta iyo Xoolaha si loogu nacfiyo loona mahdiyo Eebe, Illeen isagaa u leyley Dadkee. Nabiguna (ammaan iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Markuu koro Gaadiid wuxuu ku mahdin jiray Eebaha u jilciyey ee loo noqon xaggiisa. Az-Zukhruf (9-14).

15. Waxay uga yeeleen Eebe addoomadiisa qayb, Dadkuna waa gaaloo badane cad.

وَجَعَلُوا لَهُ مِنْ عِبَادِهِ جُزْءًا إِنَّ الْإِنْسَانَ لَكَفُورٌ مُبِينٌ ﴿١٦﴾

16. Miyuu ka yeeshay Eebe wuxuu abuuray qaarkood Gabdho, oo idiin doorey Wiilal.

أَمْ أَخَذَ وَمَا يَخْلُقُ بِنَاتٍ وَأَصْفَقَكُمْ بِالْبَيِّنَاتِ ﴿١٧﴾

17. Marka loogu bishaareeyo midkood wuxuu Eebaha Raxmaana uga yeelay mid shabbaha, wuxuu noqdaa wajigiisu mid madow oo walbahaarsan.

وَإِذَا ابْتَدَأَ أَحَدُهُمْ بِمَا صَرَبَ الرَّحْمَنُ مَتَلَاظِلٌ وَجْهَهُ، مُسْوَدًّا وَهُوَ كَظِيمٌ ﴿١٨﴾

18. Ma Eebey u yeeleen wax ku barbaara isqurxin, oon doodna cad-dayn karin.

أَمْ مِنْ يُنْسَوْنَ فِي الْحَيَاةِ وَهُوَ فِي الْأَخْصَاءِ
عَذْرًا مَبِينًا ﴿١٨﴾

19. Waxay ka yeeleen Malaa'igta ah addoomada Eebaha Raxmaan ah dhadig, miyey joogeen abuurkoodii, waan qoreynaa maragooda waana la warsan (waxaas).

وَجَعَلُوا الْمَلَائِكَةَ الَّذِينَ هُمْ عِبَادُ الرَّحْمَنِ إِنثًا
أَشْهُدُوا أَحْقَابَهُمْ سَكَتُكَ شَهَادَتُهُمْ
وَيُسْتَلُونَ ﴿١٩﴾

20. Waxay dhaheen hadduu doono Eebaha Raxmaan ah maanaan caabudneen wax kale ugumana sugnaannin wax cilmi ah arrintaas, waxaan beensheegayaal ahayna ma aha.

وَقَالُوا لَوْ شَاءَ الرَّحْمَنُ مَا عَبَدْنَاهُمْ مَأْلَهُم بِذَلِكَ
مِنْ عَلِيمٍ إِنَّهُمْ إِلَّا بَخْرُصُونَ ﴿٢٠﴾

Khalqiga dhammaantiis Eebaa leh, wax la wadaagana ma jiro, Malaa'igtuna ma aha Gabdho Eebe iyo dhadig midna ee waa addoomo Eebe oo wanaagsan, Gaaladuna waxay sheegi waa uun been cad iyo xumaan, waxayna sameeyeen gafaf badan, sida inay Eebe Ilmo u sheegeen, inay Malaa'igta Gabdho Eebe ku sheegeen, inay caabudaan waxaan xujo laheyn, inay sheegteen in Eebe u qaddaray, iyo waxyaale kale oo Jaahilnimo ah. Az-Zukhruf (15-20).

21. Mise waxaan siinnay Kitaab ka horreyey (quraanka) oy haystaan isa-gaas.

أَمْ أَنْتُمْ خَيْرُ كِتَابٍ مِّن قَبْلِهِ فَهُمْ بِهِ
مُسْتَمْسِكُونَ ﴿٢١﴾

22. Waxaybase dhaheen waxaan hellay Abbayowgannoo jid ku socda annaguna iyaga raadkoodii yaan ku hanuun-sanahay.

بَلْ قَالُوا إِنَّا وَجَدْنَا آبَاءَنَا عَلَىٰ آثَرِهِمْ وَإِنَّا عَلَىٰ
آثَرِهِمْ مُّقْتَدُونَ ﴿٢٢﴾

23. Waa saasoo kale umaannaan dirin Magaalo hortaa u dige haddii kale waxay dhihi Jireen kuwa raaxaystay annagu waxaan hellay Aabbayoowgannoo jid ku sugan annaguna raadkooda yaan ku dayanaynaa.

وَكَذَلِكَ مَا أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ فِي قَرْيَةٍ مِّن نَّذِيرٍ إِلَّا قَالَ
مُتْرَفُوهَا إِنَّا وَجَدْنَا آبَاءَنَا عَلَىٰ آثَرِهِمْ وَإِنَّا عَلَىٰ
آثَرِهِمْ مُّقْتَدُونَ ﴿٢٣﴾

24. Waxaad dhahdaa (ma waxaad raacaysaan waxaas) haddaan idiinla imaado wax ka hanuunsan waxaad ka hesheen Aabayaalkiin (oo ku sugan), waxay dhihi annagu waxa laydiin ku soo diray waannu ka Gaalownay.

* قُلْ أَلَمْ نُجِئِكُمْ بِالْهُدَىٰ وَمَا وَجَدْتُمْ عَلَيْهِ
آبَاءَكُمْ قَالُوا إِنَّا بِمَا أُرْسِلْتُمْ بِهِ كَافِرُونَ ﴿٢٤﴾

25. Markaasaan ka aarsannay, bal day siday noqotay cidhibtii beeniyayaasha (xaqa).

فَأَنْتَمْنَا مِنْهُمْ فَأَنْظِرْ كَيْفَ كَانَ عِقَابُهُ
الْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٥﴾

Gaaladu wax xujo ah iyo wax Kitaab ah uma haystaan xaqa beenintiisa, eb waxaa jira inay Aabbayaalkood oo wax ku sugnaa iyana ay ku raaceen. waa caadada Gaalada arrintaasu ayna iska, dhaxlaan. waa mid haboon inaad Aabbahaa iyo ciddii fiicanba wanaagga ku raacidid, laakiin ma haboona in cidna xumaanta lagu raaco, ee waa in wanaagga uun la fiirsado lana raaco, haddii kale aargudashada Eebe yaa daran, xaqa uun ku faan laakiin Aabbe ha ku faanin. Az-Zukhruf (21-25).

26. Xusa Markuu ku yidhi (nabi) Ibrahim Aabihiis iyo Qoomkiisii anigu waxaan bari ka ahay waxaad caabu-daysaan.

وَإِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ لِأَبِيهِ وَإِلَىٰ آلِهِ إِنِّي بَرَاءٌ مِّمَّا تَعْبُدُونَ ﴿٤٦﴾

27. Waxaanse caabudi Eebaha i abuuray isagaana i hanuunin.

إِلَّا الَّذِي فَطَرَنِي فَإِنَّهُ سَمِيحٌ عَلِيمٌ ﴿٤٧﴾

28. Wuxuuna ka yeelay Kalimada (tawxiidka) tii ku baaqi ah Faraca Ibraahiim si ay xaqa ugu noqdaan.

وَجَعَلَهَا كَلِمَةً بَاقِيَةً فِي عَقْبِهِ وَعَلَّمَهُ بَيْرُجُونَ ﴿٤٨﴾

29. Saas ma aha ee waan u raaxeeeyey kuwaas iyo Aabbayaalkood intuu uga yimaado xaqu iyo Rasuul cad (oo muuqda).

بَلْ مَتَّعْتُ هَؤُلَاءِ وَآلَهُمْ حَتَّىٰ جَاءَهُمُ الْحَقُّ وَرَسُولٌ مُّبِينٌ ﴿٤٩﴾

30. Markuu u yimid xaqii waxay dhaheen kan waa sixir annaguna waan-nu ka Gaalownay.

وَلَمَّا جَاءَهُمُ الْحَقُّ قَالُوا هَذَا سِحْرٌ وَإِنَّا بِهِ كَافِرُونَ ﴿٥٠﴾

31. Waxay dhaheen gaaladii maxaa loogu dajin waayey Quraankan nin deggan mid ka mid ah labada Magaalo oo weyn.

وَقَالُوا لَوْلَا نُزِّلَ هَذَا الْقُرْآنُ عَلَىٰ رَجُلٍ مِنَ الْقَرْيَتَيْنِ عَظِيمٍ ﴿٥١﴾

32. Miyagaa qaybin Naxariista Eebahaa annagaa u qaybinna dhexdeeda rizqigooda nolosha adduunyo waana ka kor yeellay qaarkood qaarka kale darajooyin, si leysugu shaqeeyo, Naxariista Eebahaa yaa ka khayr badan waxay kulmin.

أَمْ هُمْ يَقْسِمُونَ رَحْمَتَ رَبِّكَ لَوْ قَسَمْنَا بَيْنَهُمْ مَعِيشَتَهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَرَفَعْنَا بَعْضَهُمْ فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَاتٍ لِيَتَّخِذَ بَعْضُهُمْ بَعْضًا حُرْبًا وَرَحْمَتَ رَبِّكَ حَيْرًا مِمَّا يَجْمَعُونَ ﴿٥٢﴾

Gaal iyo Mu'min xidhiidh kama dhaxeeyo, sidii Nabi Ibrahim iyo Aabihiis iyo Qoomkiisii. mana haboona in Nicmada Eebe lagu kibro, ama khayrkiisa la doono in lagu tasarrufo. Eebaa wax bixiya, rizqiga iyo wanaaggana qaybiya, cidduu rabana siiya. Az-Zukhruf (26-32).

33. Hadduusan Dadku noqoneyn ummad kaliya (Gaalnimada) waxaan uga yeeli lahayn kuwa ka Gaalooaba Eebe guryahooda Saanqaaf Fidlo ah iyo Sallaano Fidla ah, oy ku koraan.

وَلَوْلَا أَنْ يَكُونَ النَّاسُ أُمَّةً وَاحِدَةً لَجَعَلْنَا لِمَنْ يَكْفُرُ بِالرَّحْمَنِ لِيُؤْتِيَهُمْ سُقْفًا مِنْ فِضَّةٍ وَمَعَارِجَ عَلَيْهَا يَظْهَرُونَ ﴿٣٣﴾

34. Guryahoodana waxaan uga yeeli lahayn Albaabyo iyo Sariiro ay ku dangiigsadaan oo fidla ah.

وَلِيُؤْتِيَهُمْ آتُونًا وَسُرُرًا عَلَيْهَا يَسْكُونُونَ ﴿٣٤﴾

35. Iyo Dahab, waxaas dhamaantiisana waxaan raaxada nolasha dhaw ahayn ma aha, aakhiraase u ah Eebe agtiisa kuwa dhawrsada.

وَرُحْرُقًا وَإِنْ كُنْتَ لَدَيْكَ لَمَّا مَتَّعَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا وَالْآخِرَةَ عِنْدَ رَبِّكَ لِلْمُتَّقِينَ ﴿٣٥﴾

36. Ruuxii ka jeedsada «aragbeela» xuska Eebahaa Raxmaan ah (Quraanka) waxaannu la xidhiidhinnaa shaydaan oo saaxiib u noqon.

وَمَنْ يَعِشْ عَنْ ذِكْرِ الرَّحْمَنِ نَقِيضٌ لَهُ سَبِطَانًا فَهَوَاهُ قَرِينٌ ﴿٣٦﴾

37. Shayaadiintuna waxay ka leexin Jidka (xaqa) waxayna isu maleyn inay hanuunsanyihiin (toosan yihiin).

وَالَّذِينَ لَبِئْسَ دُورُهُمْ عَنِ السَّبِيلِ وَيَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ مُهْتَدُونَ ﴿٣٧﴾

38. Markuu noo yimaaddo (Gaalku Qiyaamada) waxuu ku dhahaa (Shaydaanku) shaleytee mey dhexdeenna ahaato «wax la mid ah» fogaanshaha qorrax ka soobax iyo u dhaca, adaana u xun Saaxiib.

حَتَّىٰ إِذَا جَاءَ نَا قَالَ يَا لَيْتَ بَيْنِي وَبَيْنَكَ بُعْدَ الْمَشْرِقَيْنِ فَيَمْسُ الْقَرْيَيْنِ ﴿٣٨﴾

Xadiith waxaa ku sugnaaday: hadday adduunyadu u miisaamanto Eebe agtiisa garab kaneeco kama waraabiyeen Gaal kabbo Biyo ah waligeed, waxaa wariyey Tirmidi. Ujeeddaduna ma aha inaan la shaqeysan, shaqada xalaasha ah waa waajib, mase habboona in adduunyo uun loo go'o, oo si waalli ah loo dabo ordo, sidaad aragtid ayaamahaan, waxaase jirta Aakhiro oo kahyr ku dhanyahay, ciddii ka indha beesha Quraanka iyo xaqana waxaa lagu diri shaydaan una noqon saaxiib kana leexin xaqa, isagoo umaleyn inuu toosan yahay markeyse Qiyaamada tagaan wuu calaacali Gaalku, wuxuuna ku sheegi shaydaanka inuu yahay saaxiib kan ugu xun. Az-Zukhruf (33-38).

39. Wax idiinma tarayso Maanta hadaad dulmi fasheen inaad cadaab waadaagtaan (ku kulantaan).

وَلَنْ يَنْفَعَكُمْ أَلْوَمٌ إِذْ ظَلَمْتُمْ أَنْكُمُ فِي الْعَذَابِ مُشْتَرِكُونَ ﴿٣٩﴾

40. Ma adaa wax maqashiin kara wax ma maqle, ma adaase hanuunin Kara (toosin kara) wax ma arke iyo cid ku sugan baadi cad.

أَفَأَنْتُمْ تَسْمَعُونَ الصُّرَّةَ أَوْ تَهْدَى الْعُمَىٰ وَمَنْ كَانَ فِي صُلْبٍ مُبِينٍ ﴿٤٠﴾

41. Haddaan kulatagno adiga ku (oof-sano) annaga uunbaa ka aarsan Gaalada.

فَأَمَّا نَذَهَبَ بِكَ فَأَنَا مَهُم مُنْتَقِمُونَ ﴿٤١﴾

42. Haddaan ku tusinno waxaan u yaboohnay oo cadaab ah, waannu karraa korkooda.

أَوْ نُؤَيِّنَكَ الَّذِي وَعَدْنَاهُمْ فَإِنَّا عَلَيْهِم مُّقْتَدِرُونَ ﴿٤٢﴾

43. Ee qabso waxa lagu waxyooday Nabiyow waxaad ku sugantahay Jid toosan.

فَأَسْتَمِيعٌ بِالَّذِي أُوحِيَ إِلَيْكَ إِنَّكَ عَلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٤٣﴾

44. Quraankuna sharaf buu u yahay adiga iyo qoomkaagaba, waana leydin warsan doonaa.

وَإِنَّهُ لَلَّذِي كَرَّمَكُمُ وَلَقَوْلُكُمْ وَسَوْفَ تُسْأَلُونَ ﴿٤٤﴾

45. Warso kuwaan dirray ee kaa horreeyey oo Rasuuladannada ka mid ahaa inaan yeellay Eebaha Raxmaana Kaso-kooow Ilaahyaal la caabudo.

وَسَأَلَ مَنْ أَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ مِنْ رُسُلِنَا أَجَعَلْنَا مِنْ دُونِ الرَّحْمَنِ إِلَهًا يُعْبَدُونَ ﴿٤٥﴾

Cid dhuntay oo dulmiila ah ciduna ma toosin karto, sidaan ruux Dhagala'na wax loo maqashiin karin, mid indhola'na wax loo tusin karin, Eebana wuxuu ballanqaaday inuu ka aarsado Gaaladii Nabiga beenisay ee dhibtay, waxaase waajib ah in Quraanka si dhab ah loo qabsado, Illeen sharafta iyo cisiga Muslimiinta yaa iska lehe. waana la warsandoonaa. waxa Eebe ka soo hadhay oo la caabudana ma jiro. Az-Zukhruf (39-45).

46. Dhab ahaan yaan ugu dirray Nabi Muuse isagoo wata aayaadkanaga xagga Fircoon iyo Jamaacadiisa, wuxuu yidhi anigu waxaan ahay Rasuulkii Eebaha Caalamka.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ بِآيَاتِنَا إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَئِهِ ۖ فَقَالَ إِنِّي رَسُولُ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٤٦﴾

47. Markuu ula yimid aayaadkannaga waxay noqdeen kuwo ku qosla.

فَلَمَّا جَاءَهُمْ بِآيَاتِنَا إِذَا هُمْ مِنْهَا يَصْحَكُونَ ﴿٤٧﴾

48. Ma tusinno aayad haddii kale wey ka weyntahay walaasheed (tan kale), waxaana ku qabannay caddab inay noqdaan darteed.

وَمَا نُرِيهِمْ مِنْ آيَةٍ إِلَّا هِيَ أَكْبَرُ مِنْ أُخْتِهَا ۖ وَأَخَذْنَاهُمْ بِالْعَذَابِ لَأَعْلَاهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٤٨﴾

49. Waxay dhaheen kan Saaxirka (Caalimka) ahaw (Muuse) noo bari Eebahaa wuxuu kugula ballantamay annagu waan hanuuneynaaye.

وَقَالُوا لَأَيُّهَا السَّاحِرُ ادْعُ لِنَارِكَ يَمَا عَهْدَ عِنْدَكَ إِنَّا لَمُهْتَدُونَ ﴿٤٩﴾

50. Markaan ka faydnay xaggooda

فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُمْ الْعَذَابَ إِذَا هُمْ يَنْكُتُونَ ﴿٥٠﴾

cadaabkii waxay soo baxeen kuwo buriya (ballankii).

Qisada Nabi Muuse iyo Nabiyada kale qaarkoodba wax badanbay ku soo aroortay Quraanka, waxaase muhiim ah in lagu waano qaato lagana fogaado falalka xun xun. xaqa ku jees jeeska ballan burintana layska jiro. waxaana haboon in la toosnaado inta la dhumi ama xumaan la fali. Eebe hanna waa fajiyo wanaagga. Az-Zukhruf (46-50).

51. Wuu u dhawaaqay Fircoon Qoomkiisii wuxuu yidhi miyuusan ii sugnaan xukunka Masar, iyo Wabiyadan socota hoostayda, miyeydaan wax arkaynin.

وَنَادَى فِرْعَوْنُ فِي قَوْمِهِ قَالَ يَا قَوْمِ أَلَيْسَ لِي مُلْكُ مِصْرَ وَهَذِهِ الْأَنْهَارُ تَجْرِي مِن تَحْتِي أَفَلَا تُبْصِرُونَ ﴿٥١﴾

52. Saw anigu kama khayr rooni kan dulleysan een karayn waxcaddayn (Nabi Muuse).

أَرَأَيْتَ أَخِيرٌ مِّنْ هَذَا الَّذِي هُوَ مِثْلُ بَرِّكَاتٍ يُبِينُ ﴿٥٢﴾

53. Maxaa loogu soo tuuri waayey Jijimooyin Dahab ah, ama maxay ula imaan wayday Malaa'ig israac raacsan.

فَقُلْ أَلَيْسَ عَلَيْنَا أَسْوَرَةٌ مِّنْ ذَهَبٍ أُوتِيَنا مَعَهُ الْمَلَائِكَةُ مُقَرَّرِينَ ﴿٥٣﴾

54. Wuxuu fudaydsaday (Fircoon) qoomkiisii wayna adeecen waxayna ahaayeen Qoom faasiqiin ah.

فَأَسْتَحَفَّ قَوْمَهُ فَأَطَاعُوهُ إِنَّهُمْ كَانُوا قَوْمًا فَاسِقِينَ ﴿٥٤﴾

55. Markey na cadhagaliyeenna waan ka aarsanay xaggoda, waana maanshaynay dhamaan.

فَلَمَّا اسْتَفْرَأْنَا أَنْتَقَمْنَا مِنْهُمْ فَأَغْرَقْنَاهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٥٥﴾

56. Waxaan ka yeelley waano iyo tusaale Dadka dambe.

فَجَعَلْنَاهُمْ سُلَاقًا وَمَثَلًا لِّلْآخِرِينَ ﴿٥٦﴾

Fircoonkii Masar aad buu u inkiray xaqana u diiday, sida wax badan Quraanku ka warramay, waxaase dhab ah inaan ku jees jeeska samo falayaasha iyo wanaag u yeedhayaasha wax wanaag ah lagala kulmeynin ee khasaare iyo halaag uun lagala kulmi. tan kale Qiimuhu ma aha in Xoolo iyo dahab uun lagu siiyo, siduu mooday Fircoon iyo waxa la midka ahna la noqonin. waana inaan xumaanta laysku raacin, haddii kale waxaa la noqon Dad xun oo dulleysan, mutana ciqaabta Eebe iyo inay u noqdaan tusaale kuwa kale. Az-Zukhruf (51-56).

57. Markaan uga yeellay ina maryama (Ciise) tusaale, markaasay qoomkaagu Nabiyow ka jedsadaan.

﴿ وَمَا ضَرَبَ ابْنُ مَرْيَمَ مَثَلًا إِذَا قَوْمُكَ مِنْهُ يَصِدُّونَ ﴿٥٧﴾

58. Waxayna dheheen ma Ilaahyadanna khayr roon mise isaga, mayna kuugu qaddarin tusaale muran mooyee, waana qoom dood badan.

وَقَالُوا يَا إِلَهَنَا خَيْرٌ مَّا هُوَ مَا ضَرَبَ يَوْمَ ذَلِكَ إِلَّا جَدًّا لَّا بَلَّ هُمْ قَوْمٌ خَصِمُونَ ﴿٥٨﴾

59. Wax kale ma aha Ciise ee waa uun addoon aan u Nicmaynay ugana yeellay tusaale ree Bani Israa'iil.

إِنَّهُوَ إِلَّا عَبْدٌ أَنْعَمْنَا عَلَيْهِ وَجَعَلْنَاهُ مَثَلًا
لِّبَنِي إِسْرَائِيلَ ﴿٥٩﴾

60. Haddaan doonno waxaan idiinka yeeli lahayn Malaa'ig baddalkiinna Dhulka u hadha.

وَلَوْ نَشَاءُ لَجَعَلْنَا مِنْكُمْ مَلَائِكَةً فِي الْأَرْضِ
يَخْلُقُونَ ﴿٦٠﴾

61. Nabi Ciisana waa calaamadda Saacadda (Qiyaame) ee ha shakiyina, ina raaca kaasaa ah jidka toosane.

وَإِنَّهُ لَعِلْمٌ لِّلسَّاعَةِ فَلَا تَمْتَرُنَ بِهَا وَاتَّبِعُونِ هَذَا
صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ ﴿٦١﴾

62. Yuuna idinka leexinnin Shaydaan (Jidka) wuxuu idiin yahay Col cade.

وَلَا يَصِدُّكُمْ الشَّيْطَانُ إِنَّهُ لَكُمْ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿٦٢﴾

Nabi Ciise waa Nabi ay rumaysanyihiin Muslimiintu xaqnimadiisa sida Nabiyada kaleba Dhammaan-tood (Eebe nabadgalyo korkooda hayelee). waana mucjisooyinka Eebe iyo calaamada saacadda Qiyaame, hase yeeshee muran iyo shaydaan adeecid waxaan halaag ahayn ma tarto. Jidka toosanse waa in la raaco xaqa uu u soo dhiibay Eebe Nabiga Muxamed ah (Ammaan iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee).

Abii Umaamo waxaa laga wariyey in Rasuulkii Eebe ku soo baxay dad ku murmi Quraanka oo uu u cadhooday si daran wajigiisuna casaaday, markaas yidhi: Ha ku garaacina Kitaabka Eebe qaarkiis qaarka kale, Ciddii dhumaysana waxaa lasiiyaa muran un. Az-Zukhruf (57-62).

63. Markuu ula yimid Ciise xujooyin wuxuu ku yidhi waxaan idiin la imid xikmad iyo inaan idiin caddeeyo waxaad isku diiddan tihiin qaarkiis ee ka dhawrsada Eebe ina adeeca.

وَلَمَّا جَاءَ عِيسَىٰ بِالْبَيِّنَاتِ قَالَ قَدْ جِئْتُكُمْ
بِالْحِكْمَةِ وَلَا يُبَيِّنُ لَكُمْ بَعْضَ الَّذِي تَخْتَلِفُونَ فِيهِ
فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا ﴿٦٣﴾

64. Eebe isagaa ah Eebahay iyo Eebi-hiinba ee caabuda taasaa ah jidka toosane.

إِنَّ اللَّهَ هُوَ رَبُّكُمْ فَأَعْبُدُوهُ هَذَا صِرَاطٌ
مُسْتَقِيمٌ ﴿٦٤﴾

65. Wayse is khilaafeen Xisbiyadii dhexdooda halaagna wuxuu u sugnaaday kuwii dulmi falay Cadaab Maalin daran xaggii.

فَاخْتَلَفَ الْأَحْزَابَ مِنْ بَيْنِهِمْ فَوَيْلٌ لِلَّذِينَ
ظَلَمُوا مِنْ عَذَابِ يَوْمِ الْبِئْسِ ﴿٦٥﴾

66. Miyey sugi (Gaaladaasi) waxaan saacadda (qiyaame) ahayn inay ugu timaado si kado ah iyagoon ogayn.

هَلْ يَنْظُرُونَ إِلَّا السَّاعَةَ أَنْ تَأْتِيَهُمْ بَغْتَةً
وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٦٦﴾

Nabi Ciise markii Eebe ku soo dajiyey Kitaabka Injiil ah siiyayna xujooyin cad yey beeniyeen Gaaladii isna khilaafeen. waxaana u sugnaaday Gaaladaas Caddaab daran, wax uga gargaarina ma jiro, ee hasugeen Qiyaamada kadada ugu imaan iyagoon ogayn. Az-Zukhruf (63-66).

67. Saaxiibadu Maalinta Qiyaame qaar-kood qaarka (kale) waa u col kuwa dhawrsaday mooyee (Mu'miniinta).

الْأَخِلَاءُ يَوْمَئِذٍ بَعْضُهُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ إِلَّا الْمُتَّقِينَ ﴿٦٧﴾

68. (Waxaana loo odhan) addoomma-daydoow korkiinna cabsi ma aha Maanta mana murugoonaysaan.

يَعْبَادِ لِأَخْوَابِهِمْ يَوْمَئِذٍ وَلَا تَأْتِيهِمْ تَحَنُّونَ ﴿٦٨﴾

69. Waana kuwa rumeeyey Ayaadk-naga oo ahaa Muslimiinta.

الَّذِينَ آمَنُوا بِآيَاتِنَا وَكَانُوا مُسْلِمِينَ ﴿٦٩﴾

70. (Waxaana lagu dhihi) gala Janada idinkiyo Haweenkiinna (iyo kuwa idin la midka ah) idinkoo laydiin Nicmeeyey (laydin kana farxin).

أَدْخُلُوا الْجَنَّةَ أَشْرَفًا وَأَنْزَلُكُمْ فِيهَا مِنْ رِزْقٍ غَيْرِ الْمَوْتِ ﴿٧٠﴾

71. Waxaana lala korsocoon Weelal (Saxamo) Dahab ah iyo Koobab, waxayna ka heli (Jannada) dhexdeeda waxay doonto Naftu kuna raaxaystaan Indhuhu idinkoo dhexdeeda ku waari.

يُطَافُ عَلَيْهِمْ بِصِحَافٍ مِنْ ذَهَبٍ وَأَكْوَابٍ وَفِيهَا مَا نَشْتَهِيهِ الْأَنْفُسُ وَتَلَذُّ الْأَعْيُنُ وَأَنْتُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٧١﴾

72. Taasina waa jannadii aad ku dhasheen waxaad camalfalayseen.

وَتِلْكَ الْجَنَّةُ الَّتِي أُورِثْتُمُوهَا بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٧٢﴾

73. Waxaadna ku leedihiin dhexdeeda Faakiho badan ood xaggeeda wax ka cuntaan.

لَكُمْ فِيهَا فاكهة كثيرة منها تأكلون ﴿٧٣﴾

Saaxiibnimadu waxay qiima leedahay markey ku dhisantahay Islaamnimo, wanaag is farid, Xumaan iska reebid iyo dar Eebe, taasaana wax anfacda adduun iyo Aakhiraba, marse hadday tahay xumaan ku saaxiib iyo adduuno darteed waa khasaare labada Daroodba iyo kala carar markay dhibaato timaado. Addoomada Eebe ee wanaagsanna waxay mudan khayr Janno. waxbadanna wuxuu Quraanku ka warraam wanaagga Jannada loo darbey, iyagoo ku waari iyaga iyo Ehelkoodii wanaagsanaa. Rasuulkuna wuxuu yidhi: Hadday labo nin isu jeclaadaan dar Eebe oo midkood Bari jiro Midna Gelbeed wuu kulmin dhexdooda Maalinta Qiyaame isagoo dhihi waaka kaad ujeclaatay dartay. Ibnu Cabaas iyo Mujaahidna waxay dhaheen: waxay noqon saaxiibnimo kasta Maalinta Qiyaame Col kuwa dhawrsada mooyee. Az-Zukhruf (67-73).

74. Dambiiilayaashu waxay gali cadaabka jahannamo iyagoo ku waari.

إِنَّ الْمَجْرِمِينَ فِي عَذَابٍ مُتَسَاوِينَ ﴿٧٤﴾

75. Lagamana fudaydiyo, dhexdiiseyna ku quustaan (aammusaanna).

لَا يَفْقَرُ عَنْهُمْ وَهُمْ فِيهِ مُبْسُونَ ﴿٧٥﴾

76. Manaan dulmiyin hasa yeeshee iyagaa dulmiilayaal ahaa.

وَمَا ظَنَّمْتَهُمْ وَلَكِنْ كَانُوا هُمُ الظَّالِمِينَ ﴿٧٦﴾

77. Waxayna u dhawaaqi Maalig (Ma-

وَأَدَاؤُنَا لَكَ لِيَقْضِيَ عَلَيْكَ تَرْتِيبُكَ قَالَ إِنَّكُمْ

lagga Naarta) iyagoo dhihi Eebahaa ha na dilo markaasuu dhahaa idinku waad kuwaaraysaan (naarta).

مَكَهُونَ ﴿٧٧﴾

78. Dhab ahaanbaan idiin la nimid xaq hasa yeeshee badankiin xaquu nacay.

لَقَدْ جِئْتَكُمْ بِالْحَقِّ وَلَكِنَّ أَكْثَرَكُمْ لَاحِقٌ كِرْهُونَ ﴿٧٨﴾

79. Ma waxbayse gooyeen Gaaladu oo amar ah (dhibka Nabiga) annaguna waxbaan goynaynaa (ciqaabtooda).

أَمْرًا بِرَمُوا أَمْرًا فَإِنَّا مُتَرِمُونَ ﴿٧٩﴾

80. Mise waxay umaleeyeen inaannaan maqlayn qarsoodigooda iyo muujintoo-daba, saas ma ah ee mala'igtannadaa agtooda wax ku qoro.

أَمْ يَحْسَبُونَ أَنَّا لَا نَسْمَعُ سِرَّهُمْ وَنَجْوَاهُمْ بَلَىٰ وَرُسُلْنَا لَدَيْهِمْ يَكْتُبُونَ ﴿٨٠﴾

Eebe wuxuu ka abaal marin cidkastaa waxay kasbatay, Dambilayaashana wuxuu galin Naar jooqta ah ooy ku dhex quusan, mana uusan dulmiyin ee iyagaa is dulmiyey, waxna uma tarto geeri la doono iyo calaacal mar hadday xaqii diideen Naarna lagu xukumay, dhagar iyo khayaamana wax matarto ee waxay dhibtaa saaxiibkeed, Illeen Eebe waa wax walba oge, Malaa'igtiisuna waxay qortaa wax kasteed. Mujaahid wuxuu yidhi: Waxay dooneen Gaaladii dhagar shar markaasaa Eebe ku abaal mariyey. Az-Zukhruf (74-80).

81. Waxaad dhahdaa Nabiyow haddii Eebaha Raxmaan ah u sugnaado Ilmo anaa u hor caabudi lahaa.

قُلْ إِنْ كَانَ لِلرَّحْمَنِ وَدًّا فَأَنَا أَوْلُ الْعَبِيدِ ﴿٨١﴾

82. Waxaa ka nasahan Eebaha Samooyinka iyo Dhulka ee Eebaha Cars-higa ah waxay ku tilmaamaan.

سُبْحَانَ رَبِّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ رَبِّ الْعَرْشِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿٨٢﴾

83. Ee katag ha dhunbadeen (xumaanta) hana ciyaareen intay kala kulmaan maalintoodii loo yaboohaye.

فَذَرَهُمْ خَوْصًا وَيَلْعَبُوا حَتَّىٰ يَلْقَؤُا يَوْمَهُمُ الَّذِي يُوْعَدُونَ ﴿٨٣﴾

84. Eebe waa macbuudka Samada iyo macbuudka Dhulka, waana falsame wax og.

وَهُوَ الَّذِي فِي السَّمَاءِ إِلَهٌ وَفِي الْأَرْضِ إِلَهٌ وَهُوَ الْحَكِيمُ الْعَلِيمُ ﴿٨٤﴾

85. Waxaana barako badnaaday (sar-reeyeyna) Eebaha iska leh xukunka Samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya, agtiisaana ah ogaanshaha Saacadda (Qiyaame) xaggiisaana lay-diin celin.

وَتَبَارَكَ الَّذِي لَهُ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا وَعِنْدَهُ عِلْمُ السَّاعَةِ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٨٥﴾

86. Mana hantaan kuway caabudeen

وَلَا يَمْلِكُ الَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ

Eebe ka sokow wax shafeeca ah, hasayeeshee ciddii xaqa qirta iyagoo og (waxbay ushafeeci idanka Eebe ka dib).

الْشَّفَاعَةَ إِلَّا مَنْ شَهِدَ بِالْحَقِّ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٨٦﴾

87. Haddaad warsato Gaalada yaa abuuray waxay dhihi Eebe ee xaggee loo iili.

وَلَيْن سَأَلْتَهُمْ مَنْ خَلَقَهُمْ لَيَقُولُنَّ اللَّهُ فَأَنَّى يُؤْفَكُونَ ﴿٨٧﴾

88. Nabiguna wuxuu yidhi: Eeboow kuwani waa qoom aan rumaynayn (xaqa).

وَقِيلَ لِيِبِ رَبِّ إِيَّاتِ هَؤُلَاءِ قَوْمٌ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٨٨﴾

89. Iska saamax waxaadna dhahdaa Nabadgalyo, way ogaandoonaan (waxa ku dhacee).

فَأَصْفَحْ عَنْهُمْ وَقُلْ سَلِّمْ وَسَلِّمْ فَيَسْأَلُونَ بِعِلْمِ رَبِّكَ فَاصْفَحْ ﴿٨٩﴾

Eebe sarreeye Ilmo ma leh, illeen uma baahnee, waana ka fogyahay ceeb iyo Xumaan oo dhan, waana Ilaaha xaqa ah ee Cirka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, xukunkoodana isagaa iska leh ogna waqtiga qiyaamada, xaggiisaana loo noqon, wax shafeeca hanta oo Eebe ka soo hadhayna ma jiro, cid xaqa raacda oo Eebe idmo mooyee. Gaaladuna waa qirsanyihiin in Eebe abuuray ee waxay u diidi inay cibaadada u kali yeelaan isla wayni, Doqonnimo iyo inay xumaanta iska dabaashaan xisaab la'aan ee ha sugeen tan iyo abaalmarinta.

Sudi wuxuu yidhi: Macnuhu waxaa weeye hadduu Eebe Ilmo leeyahay Anaa u hor rumeyn lahaa inuu Ilmo leeyahay, hasa yeeshee Ilmo ma leh. Az-Zukhruf (81-89).



Suurat Ad-Dukhaan



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waannu sheegnay iyadoo kale.

حَمْدٌ ①

2. Waxaan ku dhaartay Kitaabka Cade (Quraanka).

وَالْكِتَابِ الْمُبِينِ ②

3. Annagaa dejinnay Quraanka Habeen barakeysan (Layletulqadar) annagaana wax u digi.

إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْمُبْرَكَةِ ③ إِنَّا كُنَّا مُنذِرِينَ ④

4. Habeenkaasana la kala bixiyaa amar kastoo xigmo leh.

فِيهَا يُفْرَقُ كُلُّ أَمْرٍ كَبِيرٍ ⑤

5. Waana amar agtannada ka ahaaday, annagaana wax dirra (Rasuullo).

أَمْرًا مِنْ عِنْدِنَا إِنَّا كُنَّا مُرْسِلِينَ ⑥

6. Naxariis ka ahaatey xagga Eebahaa, Eebaana wax maqle ah wax og.

رَحْمَةً مِنْ رَبِّكَ إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ⑦

7. Waana Eebaha samooyinka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya haddaad yaqiinsanaysaan.

رَبِّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا ⑧ إِن كُنْتُمْ مُوقِنِينَ ⑨

8. Allaah mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, isagaa wax nooleeya waxna dila, waana Eebihinna iyo Eebaha Aabbayaalkiinnii horreeyey.

لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ يُحْيِي وَيُمِيتُ رَبُّكُمْ وَرَبُّ آبَائِكُمُ الْأَوَّلِينَ ⑩

Eebe sarreeye wuxuu ku dhaartay inuu soo dajiyay Kitaabka Quraanka ah Habeen barakeysan oo wax kasto lakalo bixiyo, waana habeenka laylatulqaddarka ee bisha Soon ku jirta ee Quraanka la soo dajiyey siday aayado kale caddeeyeen, saasaana sugan, cidda tidhi waa Shan iyo Tobanka bisha Shacbaan wax xujo ah oo cad ma hayso.

Eebana waa naxariiste, Maqle, oge oo xukunka caalamka iska leh, wax nooleeya waxna dila, waana Eebaha Khalqiga dhammaan hor iyo dibba, ee waa in laga yaabo Eebe si dhab ah. Ad-Dukhaan (1-8).

9. Waxayse ku suganyihiin shaki, wayna ciyaari.

بَلْ هُمْ فِي شَكٍّ يَلْعَبُونَ ⑪

10. Ee sug Maalinta uu ku imaan Cirku

فَأَرْقَبَتْ يَوْمَئِذٍ النَّسَمَاءُ بِدُخَانٍ مُبِينٍ ⑫

qiiq muuqda (isagoo ku dheehan).

11. Oo dabooli Dadka, kaasina waa cadaab daran.

يَعْنَى النَّاسِ هَذَا عَذَابُ الْبِئْسَ ﴿١١﴾

12. Waxayna dheheen Eebow naga fayd cadaabka waxaan nahay Mu'miniine.

رَبَّنَا كَشِفْ عَنَّا الْعَذَابَ إِنَّا مُؤْمِنُونَ ﴿١٢﴾

13. Goormey waantoobi isagoos u yimid Rasul cad «muuqda».

أَنِّي لَهُمُ الذِّكْرَىٰ وَقَدْ جَاءَهُمْ رَسُولٌ مُّبِينٌ ﴿١٣﴾

14. Markaasay ka jeedsadeen Nabiga waxayna dheheen waa waxlabare waalan.

ثُمَّ تَوَلَّوْا عَنْهُ وَقَالُوا مُعَلَّمٌ مَّجْنُونٌ ﴿١٤﴾

15. Annagu waxaan idinka faydaynaa cadaabka wax yar, idinkuna waxaad ku noqonaysaan xumaanta.

إِنَّا كَأَشْفَاءِ الْعَذَابِ قَلِيلًا إِنْ كُنْتُمْ عَادُونَ ﴿١٥﴾

16. Maalintaan qabanayno qabashada wayn (Qiyaamada) (ama Badar) waanu aarsan.

يَوْمَ تَبُطُّ أَبْطُسَ السُّكَّرَىٰ إِنَّا فَتَقِمْوْنَ ﴿١٦﴾

Nabigu wuxuu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebihiin wuxuu idiinka digay Saddex: Qiiq u qabta Mu'minka sida hargab Gaalkana qabta intuu meel walba ka baxo, iyo Daabad iyo Dajaal, waxaa wariyey Ibnu Jariir iyo Dhabraani. Madax adayg iyo Gaalimana wax ma taraan illeen Eebaa ka aarsan gaalo iyo xaq diidayaasha ku tilmaami Nabiga inuu waalanyahay, kuwaasi wax yar ha sugeen. Ad-Dukhaan (9-16).

17. Dhab ahaan baan Imtixaannay hortood qoomkii Fircoon, waxaana u yimid Rasul sharaf leh.

﴿ وَلَقَدْ فَتَنَّا قَبْلَهُمْ قَوْمَ فِرْعَوْنَ وَجَاءَهُمْ رَسُولٌ كَرِيمٌ ﴿١٧﴾

18. Isagoo dhihi ii dhiiba addoomada Eebe (ama maqalka) waxaan idiin ahay Rasul aammin ah.

أَن أَدُّوا إِلَيَّ عِبَادَ اللَّهِ إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿١٨﴾

19. Hana iska wayneynina Eebe waxaan idiin la imid xujo cade.

وَأَن لَّا تَعْلُوا عَلَيَّ إِنَّي أَعْتَبِكُمْ إِبْرَاهِيمَ سُلْطَانٍ مُّبِينٍ ﴿١٩﴾

20. Waxaana ka magangalay Eebahay iyo Eebihiin inaad i dhagaxyeysaan.

فَلْيَا عُدَّتْ يَرْبِيَّ وَرَبِّكُمْ أَن تَرْتَحِمُونَ ﴿٢٠﴾

21. Ee haddaydaan i rumeyn iga fogaa-da (idaaya).

وَإِن لَّرَؤُوسُهُمْ لِيَفْتَرُونَ ﴿٢١﴾

22. wuxuuna u qayliyey Eebihiis in kuwaasu yihiin Qoom dambiilayaal ah.

فَدَعَا رَبَّهُ أَن هَؤُلَاءِ قَوْمٌ مُّجْرِمُونَ ﴿٢٢﴾

23. guuri addoomadayda Habeennimo,
waa laydin raaciye.

فَأَسْرِ بِعِبَادِي لَيْلًا إِذْ كُرُّمُتَّبِعُونَ ﴿٢٣﴾

24. kana tag badda iyadoo xasilloon oo
furan iyagu waa col la maanshayne.

وَأَتْرِكُ الْبَحْرَ هَوًّا إِنَّهُمْ جُنْدٌ مُّعْرَفُونَ ﴿٢٤﴾

wax badan yuu Quraanku ka warramay Fircoon iyo Qoomkiisii iyo Nabi Muuse, iyo wixii isku qabsaday, waxay ku dambaysay oo ah xaqii oo kor maray, iyo Gaaladii oo la halaagay, waxaase loo baahanyahay uun in lagu waano qaato, lagana leexo Jidka Gaalada. Ad-Dukhaan (17-24).

25. immisey ka tageen Beero iyo Ilo.

كَمْ تَرَكُوا مِنْ جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ ﴿٢٥﴾

26. iyo Tallaal iyo meel sharaf leh.

وَزُرُوعٍ وَمَقَامٍ كَرِيمٍ ﴿٢٦﴾

27. iyo Nicmooyin ay ku raaxaysa-
nayeen.

وَنَعْمَ كَانُوا فِيهَا فَكِيهِينَ ﴿٢٧﴾

28. xaalkuna waa saas, waxaana dha-
xalsiinnay qoom kale.

كَذَلِكَ وَأَوْرَثْنَاهَا قَوْمًا آخَرِينَ ﴿٢٨﴾

29. uma ooyin samada iyo Dhulku
korkooda, lamana sugin.

فَمَا تَبُكُّنَّ عَلَيْهِمْ السَّمَاءُ وَالْأَرْضُ وَمَا كَانُوا

مُنظَرِينَ ﴿٢٩﴾

30. waana ka korinnay ree Bani Israa'iil
cadaab wax dulleeya.

وَلَقَدْ نَجَّيْنَا بَنِي إِسْرَائِيلَ مِنَ الْعَذَابِ الْمُهِينِ ﴿٣٠﴾

31. (Fircoombaan ka korinnay) wuxuu-
na ahaa isla weyne xadgudbayaasha ka
mid ah.

مِنْ فِرْعَوْنَ إِنَّهُ كَانَ عَالِيًا مِنَ الْمُسْرِفِينَ ﴿٣١﴾

32. waxaana ka doorannay (dadkii
waqtigoodii) annagoo og.

وَلَقَدْ اخْتَرْنَا لَهُمْ عَلَىٰ عِلْمٍ عَلَىٰ الْعَالَمِينَ ﴿٣٢﴾

33. waxaana siinnay aayado imtixaan
cad ku sugan yahay.

وَأَتَيْنَاهُمُ مِنْ آيَاتِنَا مَا فِيهِ لَكُلِّكُمْ حُكْمٌ ﴿٣٣﴾

raaxo adduunyo iyo ku Nicmeysigeedu wax matarto hadday ciqaab iyo halaag ka dambeyni, taasoo ah Nicmadoo laga wareejiyo iyo Cidhib xun sidii fircoon iyo qoomkiisii lagu falay Cir iyo Dhul midna ma xusuusan umana ooyin, Nicmadana waxaa lagu dhawraa mahad Eebe iyo toosnaan.

Mujaahid iyo Sufyaan waxaa laga wariyay in Cirka iyo Dhulku u ooyi Mu'minka Afartan Maalmood (markuu dhinto). Ad-Dukhaan (25-33).

34. kuwaasi (Gaaladu) waxay dhihi.

إِنْ هَؤُلَاءِ لَيَقُولُونَ ﴿٣٤﴾

35. arrintu ma aha geerida hore
mooyee, mana nihin kuwo la soobixin.

إِنْ هِيَ إِلَّا أَمْوَاتُنَا الْأُولَىٰ وَمِمَّا نَحْنُ بِمُنشَرِينَ ﴿٣٥﴾

36. noo keena aabayowganno haddaad
run sheegaysaan.

فَأُولَٰئِكَ يَأْتُونَ بِآيَاتِنَا إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٣٦﴾

37. miyagaa khayr roon mise qoomkii Tubbac iyo kuwii ka horreeyey waan halaagnay waxayna ahaayeen dambii-layaal.

أَهْمَ حَيْرًا أَمْ قَوْمٌ تُبِّعُوا الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ أَهْلَكَهُمْ
إِنَّهُمْ كَانُوا مُجْرِمِينَ ﴿٣٧﴾

38. Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya umaannaan abuurin ciyaar.

وَمَا خَلَقْنَا السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا الْعِيبِينَ ﴿٣٨﴾

39. mana aannaan u abuurin wax aan xaq ahayn, hasa yeeshee badankood ma oga.

مَا خَلَقْنَاهُمَا إِلَّا بِالْحَقِّ وَلَكِنْ أَكْفَرَهُمْ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٩﴾

40. maalinta kala bixinta yaa ballan u ah dhammaan.

إِنَّ يَوْمَ الْفَصْلِ يَبْقَتُهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٤٠﴾

41. waana Maalintaan Qaraabannimo waxba laysugu tarayn laysuna gargaarayn.

يَوْمَ لَا يَنْبَغِي مَوْلَى عَنْ مَوْلَى شَيْئًا وَلَا هُمْ
يُنصَرُونَ ﴿٤١﴾

42. cid Eebe u naxariisto mooyee, illeen waa adkaade naxariistee.

إِلَّا مَنْ رَحِمَ اللَّهُ إِنَّهُ هُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ ﴿٤٢﴾

cid diida oo isla wayn iyo cid kalaba Eebe wuu dili wuuna soo nooleyn, dhabtuna waa saas, Eebana wuxuu u abuuray Cirka iyo dhulka iyo waxa udhaxeeyaba Xaq iyo in lays abaal mariyo, arrintana Maalintaas Eebaa iska leh, wax isu gargaari ama wax isu tarina ma jiro, cid Eebe u naxariisto mooyee waana arrin ay waajib tahay in aad loo eego looguna darbado. Ad-Dukhaan (34-42).

43. Geedka Zaquumka ah.

إِنَّ سَجْرَةَ الزَّقُّومِ ﴿٤٣﴾

44. waa cunnada dambi badanaha.

طَعَامُ الْأَثِيرِ ﴿٤٤﴾

45. waana Laami oo kale kuna kari Caloosha.

كَالْمُهْلِ يَغْلِي فِي الْبُطُونِ ﴿٤٥﴾

46. sida Xamiimka (Kulayl daran) oo kale.

كَغَلِي الْحَمِيمِ ﴿٤٦﴾

47. (waxaana lagu dhihi) qabta Gaalka una Jiida Jaxiimo dhexdeeda.

خُدُودُهُ قَاعٌ مِلْوَةٌ إِلَى سَوَاءٍ الْحَمِيمِ ﴿٤٧﴾

48. markaas ku shuba Madaxiisa kor-kiisa cadaab kulul.

ثُمَّ صُبُّوا فَوْقَ رَأْسِهِ مِنْ عَذَابِ الْحَمِيمِ ﴿٤٨﴾

49. (waxaana lagu dhihi) dhadhami (Cadaabka) waxaad tahay adkaade sharaflehe.

ذُقْ إِنَّكَ أَنْتَ الْعَزِيزُ الْكَرِيمُ ﴿٤٩﴾

50. kaasina waa kaad ahaydeen kuwo shakiya (Cadaabka).

إِنَّ هَذَا مَا كُنْتُمْ بِهِ تَمْتَرُونَ ﴿٥٠﴾

51. kuwa dhawrsadana waxay ku sugnaan meel aamin ah.

إِنَّ الْمَتَّقِينَ فِي مَقَامٍ أَمِينٍ ﴿٥١﴾

52. Jannooyin iyo Ilo (yey ku sugnaan).

فِي جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ ﴿٥٢﴾

53. waxayna xidhan Xariir jilicsan iyo mid adag (oo dhalaali) wayna is qaabili.

يَكْسُوتُ مِنْ سُنْدُسٍ وَإِسْتَبْرَقٍ

مُتَقَابِلِينَ ﴿٥٣﴾

54. saasoo kale waxaa u sugnaaday Haween Indho waaweyn.

كَذَلِكَ وَرَزَجْنَهُمْ بِحُورٍ عِينٍ ﴿٥٤﴾

55. waxayna u yeedhan Jannada dhexdeeda Khudaar kasta iyagoo aamin ah.

يَدْعُونَ فِيهَا بِكُلِّ فَلَكَهَةٍ ءَامِنِينَ ﴿٥٥﴾

56. mana ku dhadhamiyaan Jannada dhexdeeda Geeri, Geeridii hore mooye, wuxuuna ka dhawray (Eebe) Cadaabka Jaxiimo.

لَا يَدْعُونَ فِيهَا الْمَوْتَ إِلَّا الْمَوْتَةَ

الْأُولَىٰ وَوَقَّعَهُمْ عَذَابَ الْجَحِيمِ ﴿٥٦﴾

57. waana fadliga Eebahaa, taasina waa liibaanta wayn.

فَضْلًا مِّن رَّبِّكَ ذَٰلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿٥٧﴾

58. waxaan ugu fududaynay Quraanka Carrabkaaga inay waantoobaan.

فَإِنَّمَا يَسْتَرْزِقُهُ بِلسَانِكَ لَعَلَّهُمْ

يَتَذَكَّرُونَ ﴿٥٨﴾

59. ee sug iyaguna way sugiye.

فَأَرْزُقْهُمْ مِّنْ رَّبِّكَ إِنَّهُمْ لَمُرْتَدِفُونَ ﴿٥٩﴾

Rasuulku wuxuu yidhi: (Ammaan iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Waxaa lagu odhan Ehelu Jannaha waxaa idiin sugnaaday inaad caafimaadsanaataan oydaan Bukoonnin waligiin, iyo inaad Noolaataan oydaan dhimannin waligiin, iyo inaad Nicmeysataan oydaan rafaadin waligiin, iyo inaad Da'yaraatan oydaan gaboobin waligiin. Waxaa wariyay Muslim.

Dhabtuna waa inay arrintaasu tahay Liibaanta wayn ee Gaalo ha sugto dulli iyo Cigaab, Mu'miniintuna sharaf iyo wanaag. Ad-Dukhaan (43-59).



Suurat Al-Jaathiyah

سُورَةُ الْجَاثِيَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. waa soo hormaray macnaheedu.

حَمْدٌ

2. soo dajinta Kitaabka (Quraanka) ah wuxuu ka ahaaday Eebaha adkaada ee falka san.

نَزِيلَ الْكِتَابِ مِنَ اللَّهِ الْعَزِيزِ الْحَكِيمِ

3. Samooyinka iyo Dhulka dhexdiisana aayaadbaa ugu sugan Mu'miniinta.

إِن فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ لَآيَاتٍ لِّلْمُؤْمِنِينَ

4. abuurkiinna iyo waxa Eebe ku fidin «abuuri» Dhulka oo wax socda ah aayaadbaa ugu sugan ciddii wax yaqiinsan.

وَفِي خَلْقِكُمْ وَمَا يَبُذُّ مِنْ دَابَّءٍ آيَاتٍ لِّقَوْمٍ يُوقِنُونَ

5. iskhilaafka Habeenka iyo Maalinta iyo waxa Eebe ka soo dajiyey Samada oo Rizqi ah oo ku nooleeyo Dhulka intuu dhintay ka dib iyo gagadoonka Dabaylaha waxaa ugu sugan aayaad ciddii wax kasi.

وَأَخْتَلَفَ اللَّيْلُ وَالنَّهَارُ وَمَا أَنْزَلَ اللَّهُ مِنَ السَّمَاءِ مِنْ رِزْقٍ فَأَحْيَا بِهِ الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا وَتَصْرِيفِ الرِّيحِ آيَاتٌ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ

Quraanka sharafta leh Eebaa soo dajiyay, Samada, Dhulka wax kasta ee Eebe ku fidiyay Dhulka, Habeenka, Maalinta, Roobka iyo gagadoonka Dabaylaha waxay aayaad iyo Calaamo ugu sugan tahay Mu'miniinta xaq yaqiinsan ee waxkasi, waana in la raaco amarka Allaha ahaysiiyey waxyaalaha, laguna dhaqmo kitaabkiisa, Rumeyn, xukun, akhlaaq, Mucaamalo iyo wax kastoo tallaaba ah. Al-Jaathiyah (1-5).

6. taasi waa aayaadka Eebe aan ku akhriyeyno korkaaga si xaq ah, ee hadalkay Eebe ka dib iyo aayaadkiisa rumayn.

بَلَاغٌ آيَاتٍ اللَّهُ تَنَزَّلُهَا عَلَيْكَ بِالْحَقِّ فَبِأَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَ اللَّهِ وَآيَاتِهِ يُؤْمِنُونَ

7. halaagna wuxuu u sugnaaday beenaale dambi badan dhammaantiis.

وَيَذُلُّ لِكُلِّ آفَاكٍ أُثِيمٍ

8. oo maqli aayaadka Eebe oo la akhriin haddana daa'ima gaalnimo, isagoo iski-

يَسْمَعُ آيَاتِ اللَّهِ تُنزَّلُ عَلَيْهِ ثُمَّ يَصْرُفُ مُسْتَكْبِرًا

brin sidii isagoon maqlin, ugu bishaaree cadaab daran.

كَانَ لِرَبِّهِمْ إِسْغَابٌ بِعَذَابِ الْبَاطِلِ ﴿٨﴾

9. markuu ogaado aayaadkannaga wax ka mid ah wuxuu ka yeeshaa jeesjees, kuwaasina waxaa u sugnaaday cadaab wax dulleeya.

وَإِذَا عَلِمَ مِنْ آيَاتِنَا سُوءَ التَّحَدُّثِ أَهْلَهُمْ أُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ مُهِينٌ ﴿٩﴾

10. waxaa koobi, «kana dambeysa» Naarta Jahannamo, waxna uma taro waxay kasbadeen, iyo waxay ka yeesheen Eebe ka sokow owliyo, waxayna mudan Cadaab wayn.

مِن رَّبِّهِمْ جَهَنَّمَ وَلَا يُعْنِي عَنْهُمْ مَا كَسَبُوا سَيِّئًا وَلَا مَا اتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ أَوْلِيَاءَ لَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٠﴾

11. Quraankani waa hanuun, kuwii ka gaaloobay aayaadka Eebhoodna waxaa u sugnaaday Cadaab xumaan daran.

هَذَا هُدًى وَالَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِ رَبِّهِمْ لَهُمْ عَذَابٌ نَرِيحٍ أَلِيمٌ ﴿١١﴾

Cid Quraanka rumeyn wayday wax xaq ah oo kale ma rumeysa, Been badane, Dambi badane maqla Quraankoo la akhrin markaas iskibriya xumaanna ku madaxtaagi, kuna jeesjeesi Quraanka waxaa u sugnaaday Cadaab daran oo wax dulleeya, wax Eebe ka sokeeya oo wax u tarina ma jiro, ee xaq cad uun ha la raaco isagaa waxtree. Al-Jaathiyah (6-11).

12. Eebe waa kan idiin fududeeyey Badda say ugu socoto Doonnidu «iyo Markabku» dhexdiisa amarka Eebe, iyo inaad gaadhaan Fadligiisa iyo inaad ku mahadisaan.

* اللَّهُ الَّذِي سَخَّرَ لَكُمْ الْبَحْرَ لِتَجْتَرِي الْفُلُكُ فِيهِ بِأَمْرِهِ وَلِتَبْتَغُوا مِنْ فَضْلِهِ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٢﴾

13. wuxuu idiin fududeeyey waxa ku sugan samooyinka iyo Dhulka Dhammaan xagiisay ka ahaadeen, arrintaasna waxa ugu sugan aayaad ciddii fikiri.

وَسَخَّرْنَاكُمْ فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ جَمِيعًا بِأَمْرِنَا فِي ذَلِكَ لَا إِلَهَ إِلَّا قَوْمٌ يَتَفَكَّرُونَ ﴿١٣﴾

14. waxaad u dhahdaa kuwa rumeeyey u dhaafa kuwaan ka yaabayn ciqaabta Eebe si uu uga abaal mariyo qoom waxay kasbadeen.

قُلْ لِلَّذِينَ آمَنُوا يَغْفِرُ وَاللَّذِينَ لَا يَزُجُرُونَ أَيَّامَ اللَّهِ لِيَجْزِيَ قَوْمًا بِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿١٤﴾

15. ruuxii camal fiican fala Naftiisuu u falay, ruuxii Xumaan sameeyana waxay uun dhibi Naftiisa markaas xagga Eebe uunbaa laydiin celin.

مَنْ عَمِلَ صَالِحًا فَلِنَفْسِهِ. وَمَنْ أَسَاءَ فَلِنَفْسِهِ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكَ تُرْجَعُونَ ﴿١٥﴾

waxkasta Eebaa abuuray isagaana sakhiray, sida Badda, Markabka, waxa Samada ku sugan iyo waxa Dhulka ku sugan, dhammaanna xagga Eebe yey ka ahaadeen, oo ma jiro wax la wadaaga Eebe Maamulka, waxaa uun la dhexdabaalan Nicmada Eebe iyo Khalqigiisa, waase in la fikiro, Camal wanaagsanna lala yimaaddo, xumaantana laga fogaado, mana habboona in Nicmada Eebe iyo Fadligiisa lagu kibro laysna weyneyo adoon waxba ahayn, kuna turrayn, oo miskiin ah. Al-Jaathiyah (12-15).

16. dhab ahaan baan u siinnay ree Binii Israa'iil Kitaabka iyo Xukun iyo Nabinnimo, waxaana ku arzuqnay wax wanaagsan, waxaana ka fadillay Caa-lamkii (markaas).

وَلَقَدْ آتَيْنَا بَنِي إِسْرَائِيلَ الْكِتَابَ وَالْحُكْمَ وَالنُّبُوَّةَ
وَرَزَقْنَاهُمْ مِنَ الظَّالِمِينَ وَصَدَّقْنَاهُمْ عَلَى الْعَالَمِينَ ﴿١٦﴾

17. waxaana siinay xujooyin ka mid ah amar, ismana khilaafin, inta cilmi u yimid ka dib mooyee, waxayna u diideen Xasad iyo Dulmi, dhexdooda ah, Eebahaana wuu kala xukumi dhexdooda Maalinta Qiyaame waxay isku khilaafsan yihiin.

وَأَتَيْنَاهُم بَيِّنَاتٍ مِنَ الْأَمْرِ فَمَا اخْتَلَفُوا إِلَّا مِنْ
بَعْدِ مَا جَاءَهُمُ الْعِلْمُ بَعْثًا بَيْنَهُمْ إِنَّ رَبَّكَ يَقْضِي
بَيْنَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فِيمَا كَانُوا فِيهِ
يَخْتَلِفُونَ ﴿١٧﴾

18. waxaana ku yeellay waddo amarka Diinta ah, Ee raac, hana raacin hawada kuwaan wax ogayn.

ثُمَّ جَعَلْنَاكَ عَلَى شَرِيعَةٍ مِنَ الْأَمْرِ فَاتَّبَعَهَا
وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَ الَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨﴾

19. iyagu kaagama taraan Eebe xaggiisa waxba, Daalimiintana qaarkood wuxuu u yahay sokeeye qaarka kale, Eebana waa u wali kuwa dhawrsada.

إِنَّهُمْ لَنْ يَغُفُّوا عَنكَ مِنَ اللَّهِ شَيْئًا وَإِنَّ الظَّالِمِينَ
بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ وَاللَّهُ وَلِيُّ الْمُتَّقِينَ ﴿١٩﴾

20. kaasi (Quraanku) waa aragti (Nuur-ka) Dadka iyo hanuun iyo Naxariis ciddii waxyaqiinsan.

هَذَا صَبْرٌ لِلنَّاسِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ
لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴿٢٠﴾

Bini Israa'iil wuxuu Eebe siiyay waqtiyadii hore Kitaabo iyo in Nabiyo laga bixiyo, waxayse ku jawaabeen is khilaaf iyo xaq diiddo xasad iyo isla wayni darteed, taasina ma aha waxay ku faani karaan Gaalada Yuhuud, maxaayeley Nabiyadu waxay ahaayeen Muslimiin, waxaan isaga ahayn wax mataro. saas darteed yuu Eebe u faray Nabiga inuu ku toosnaado waddada xaqa ah iyo Shareecada Islaamka, oosan maqlin warka kuwaan wax ogayn, oon waxna utarayn, sokeeye dadna wax ma tarto ee waxaa waxtari gargaarka Alle iyo xaq raacidda. Al-Jaathiyah (16-20).

21. mise waxay u maleeyeen kuwii kasbaday xumaanta inaan kayeeleyno kuwa xaqa rumeeyey ee camal fiican falay oo kale, nolol iyo geeriba, waxaa xun waxay xukumi.

أَمْ حَسِبَ الَّذِينَ اجْتَرَحُوا السَّيِّئَاتِ أَنْ نَحْنَلَهُمْ
كَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ سَوَاءً مَعَهُمْ
وَمِمَّا نُهُمْ سَاءَ مَا يَحْكُمُونَ ﴿٢١﴾

22. Eebaa u abuuray samooyinka iyo Dhulka, xaq iyo in laga abaal mariyo Naf walba waxay kasbatay, lamana dulmiyo.

وَخَلَقَ اللَّهُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ وَالَّذِينَ
كُلُّ نَفْسٍ بِمَا كَسَبَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٢٢﴾

23. ka warran ruux ka yeeshay ilaahiisa hawadiisa, oo Eebe dhumiyeey isagoo cilmi leh, oo daboolay maqalkiisa iyo qalbigiisa, yelayna araggiisa dabool, yaa hanuunin Eebe kadib, miyaydaan wax xusuusanayn.

أَفَرَأَيْتَ مَنْ اتَّخَذَ إِلَهَهُ هَوَاهُ وَأَصْلَهُ اللَّهُ عَلَىٰ عِلْمٍ وَحَرَ عَلَيَّ
سَمْعَهُ وَقَلْبَهُ. وَجَعَلَ عَلَىٰ بَصَرِهِ غَشَاةً فَمَنْ يَهْدِيهِ
مِنْ بَعْدِ اللَّهِ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٢٣﴾

24. waxay dheheen Gaaladii wax kale ma jiro ee waa uun nolashanada dhaw, waana dhimaneynaa qaarna noolaan, waxaan waqtiga ahayna nama dilo, wax ogaansho ahna uma leh arrintaas waxaan male ahayna kuma socdaan.

وَقَالُوا مَا هِيَ إِلَّا حَيَاتُنَا الدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا وَمَا نُهْلِكُنَا إِلَّا
الدَّهْرَ وَمَا لَهُم بِذَلِكَ مِنْ عِلْمٍ إِنْ هُمْ إِلَّا يَظُنُّونَ ﴿٢٤﴾

25. marka lagu akhriyo korkooda aayaadkannaga oo cad cad wax xuja ah ma helaan oon ahayn noo keena aabbayowganno haddaad run sheegaysaan.

وَأَذِّنْ لِقَوْمِهِمْ آيَاتِنَا بُيُوتٍ مَأْكُونٍ حَسْرَةً لِّأُولَٰئِكَ
أَنْتُمْ لِرَبِّكُمْ تَارِكُونَ ﴿٢٥﴾

26. waxaad dhahdaa Eebaa idin nooleeya idinna dili, idinna kulmin Maalinta Qiyaame, shakina ma leh, laakiin Dadka badankiis ma oga.

قُلْ اللَّهُ يُحْيِيكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُجْمَعُ كَوْمًا إِلَىٰ يَوْمِ الْقِيَامَةِ
لَا يَرْتَابُ فِيهِ وَلَكِنْ أَكْثَرُ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢٦﴾

samafale iyo xumaanfale isku mid Eebe kama dhigo Nolol iyo Geeri midna, Eebana wuxuu u abuuray Samada iyo Dhulka xaq iyo inuu abaal mariyo naf walba, cid hawadeeda raacday oo dhuntay iyadoo cilmi oo Dhago, Qalbi, iyo arag beelay cidna ma hanuuniso, Gaalada caqliga xun oo lagu magacaabi jiray Dahriyiin haddana lagu magacaabo Shuuciyiin waxay sheegen in waqtigu xun Dili, waxse ma oga ee Eebaa waxdila, waxna nooleeya, Qiyaamaana la hor tagi, cidwalbana abaal marin. Al-Jaathiyah (21-26).

27. Eebaa iska leh xukunka samooyinka iyo Dhulka, Maalintay kacdo Saacadda Qiyaame maalintaasay Khasaari xumaanlowgu.

وَلِلَّهِ مُلْكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ يُومِدُ
يَحْسُرُ الْمُبْطِلُونَ ﴿٢٧﴾

28. waxaadna arki ummad kasta iyadoo Lawyaha ku fadhida Qiyaamada, Ummad kastana waxaa loogu yeedhi Ki-taabkii «camalkeeda» Maalintaas

وَرَأَىٰ كُلُّ أُمَّةٍ جَاثِيَةً كُلُّ أُمَّةٍ تُدْعَىٰ إِلَىٰ كِتَابِهَا الْيَوْمَ تُحْجَرُونَ
مَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٨﴾

waxaa laydiinka abaalmarin waxaad camalfaleyseen.

29. kani waa Kitaabkannagii wuxuuna ku hadli xaq korkiinna, annaguna waan qoraynay waxaad camal falaysaan.

هَذَا كِتَابُنَا يُنطِقُ عَلَيْكَ بِالْحَقِّ إِنَّا كُنَّا نَسْتَنسِخُ
مَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٩﴾

30. kuwa xaqa rumeeyey oo camal fiican falay wuxuu galin Eebohood Naxariistiisa, taasina waa liibaan wayn.

فَأَمَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَيُدْخِلُهُمْ
رَبُّهُمْ فِي رَحْمَتِهِ ذَلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْمُبِينُ ﴿٣٠﴾

31. Kuwa Gaalobayse waxaa lagu dhihi miyeyna ahayn aayaadkeyga kuwa korkiinna lagu akhriyo ood iskibriiseen noqoteenna qoom dambi falayaal ah.

وَأَمَّا الَّذِينَ كَفَرُوا أَفَلَمْ تَكُنْ ءَلِيًّا تَتْلَىٰ عَلَيْهِمْ فَمَا سَتَكِرْتُمْ
وَكُنْتُمْ قَوْمًا تُجْرِمُونَ ﴿٣١﴾

32. marka la dhaho yabooha Eebe waa xaq, Saacadda (Qiyaamana) shaki ma leh, waxaad dhahdaan ma naqaan Saacadda (qiyaame) waannu uun malayn mase yaqiinsanin.

وَإِذْ أَقِيلَ إِنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ وَالسَّاعَةُ لَا رَيْبَ فِيهَا فَلْتُمُ
مَا تَدْرِي مَا السَّاعَةُ إِنَّ نَظْنَ الْأَطْنَآءِ وَمَا تَنْحُنُ
بِمُسْتَقْبَلِينَ ﴿٣٢﴾

Xukunka Samada iyo Dhulka iyo Khalqiga dhammaantiis Eebaa iska leh, Maalinta Qiyaamana waxaa khasaari Xumaanloow, cid walbana waxaa la arki iyadoo ku fadhida Jilbaha, oo qaadan Kitaabkii camalkeeda, Nabigu wuxuu yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) «waxaad Mooddaa inaan arko idinkoo Jilbaha ku fadhiya Taag ka sokeeya Jahannamo». Kitaabka Eebena xaqbuu ku hadli, kuwa fiicanna Naxariista Eebey heli iyo Liibaantiisa, kuwa xunna waxay mudan abaalmarin daran, maxaa yeeley way iskibriyeen xaqiina way beeniyeen waxna ma rumeeynin. Al-Jaathiyah (27-32).

33. waxaa u muuqan Gaalada xumaantay camalfaleen (Ciqaabteedi) waxaana koobi waxay ku jees jeesi jireen (ciqaabtiisii).

وَبَدَّ لَهُمْ سَيِّئَاتِ مَا عَمِلُوا وحَاقَ بِهِمْ مَا كَانُوا بِهٖ
يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٣٣﴾

34. waxaana loo dhihi Maanta (Qiyamada) waannu idinka tagi (idinko cadaaban) sidaad u halmaanteen la kulanka Maalintiinnan, Hooygiinnuna waa Naar wax idiin gargaarana ma jiro.

وَقِيلَ الْيَوْمَ نَسْتَكْفُرُ بِمَا كُنَّا نَسِيبُهُ لِقَاءَ رُبِّكُمْ هَذَا
وَمَا وَكُنَّا لِنَأْتِيَنَّهُ وَمَا لَكُمْ مِّنْ نَّصِيرِينَ ﴿٣٤﴾

35. Arrintaasna waxaa ugu wacan inaad ka yeelateen aayaadka Eebe Jees jees, idinna dhagartay nolosha dhaw (ee adduun) Maanta Qiyaamada lagama bixiyo Naarta, cudurdaarna lama warsado.

ذَلِكُمْ بِأَنَّكُمْ اتَّخَذْتُمْ ءَالِهَةً مِّمَّنْ دُونِ اللَّهِ هُرُوا وَعَزَّزْتُكُمُ الْيَوْمَ
الَّذِينَ ءَالَيْتُمْ فَالْيَوْمَ لَا يُخْرِجُونَ مِنْهَا وَلَا هُمْ يُسْتَعْتَبُونَ ﴿٣٥﴾

36. mahad Eebaa iskaleh Eebaha Samooyinka iyo Dhulka, Eebaha caalamkana ah.

فَلِلَّهِ الْحَمْدُ رَبِّ السَّمَوَاتِ وَرَبِّ الْأَرْضِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٣٦﴾

37. waxaana u sugnaatay waynida Samooyinka iyo Dhulka dhexdiisa, waana adkaade falsan.

وَالَّذِي كُنَّا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٣٧﴾

Xumaanta ciqaabteeda waa la arki, maalinta abaalmarintana waxaa lagaga tagi xumaanle oo dhan Naar daran siduu u halmaamay xaqa, gargaarna ma helo, illeen addunyaa waashaye, lagamana saaro naarta, cudurdaarna lama warsado, Mahad, weyni, xukun iyo tasarrufna waxaa iska leh maalintaas qiyaame iyo had iyo jeerba Eebaha caalamk ee waxwalba ahaysiiyey, una ahaan doono. waxaa sugnaatay in Eebe ku dhihi addoommadiisa qaar (qiyaamada) miyaan kuu guurinnin, miyaanaan ku sharfin, miyaanaan kuu sahlin waxaad korto sida Fardaha iyo Geela, miyaanaan madax kaa dhigin oodan xukumin, wuxuuna dhahaa dhab ahaan waad yeeshay, wuxuuna dhahaa Eebe ma waxaad u malaysay inaad nala kulmiheyn, wuxuuna dhahaa maya, markaasuu Eebe dhahaa maanta waxaa lagugu dayn sidaad ii halmaantay. Al-Jaathiyah (33-37).



Suurat Al-Axqaaf



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo Mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxay ku Tusin mucjisada Quraanka ee wayn, Eebaa ogna waa la dhahaa.

حَم

2. Kitaabka (Quraanka) ah wuxuu ka soo dagay Eebaha adkaada ee falka san xaggiisa.

تَنْزِيلِ الْكِتَابِ مِنَ اللَّهِ الْعَزِيزِ الْحَكِيمِ

3. Samaawaadka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeyana waxaan xaq iyo muddo magacaaban ahayn uma aannaan abuurin, kuwii gaaloobayna wixii loogu digay (ee quraanka) ah way ka jeedsadeen.

مَا خَلَقْنَا السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا إِلَّا بِالْحَقِّ وَأَجَلٍ مُّسَمًّى وَالَّذِينَ كَفَرُوا عَمَّا أُتُوا مُعْرِضُونَ

4. Waxaad Dhahdaa nabiyooow bal ka warrama waxaad caabudaysaan ee Eebe ka soo hadhay ina tusiya waxay ku abuureen dhulka, ama shirkad ah oy ku leeyihiin Samaawaadka, ii keena (oo i tusiya) Kitaab Quraanka, ka horreeyay, ama wax raad cilmi ah, haddaad run sheegeysaan.

قُلْ أَرَأَيْتُمْ قَاتِلِمْهُم مِّنْ دُونِ اللَّهِ أَرْوَاهُ مَا دَا خَلَقُوا مِنَ الْأَرْضِ أَمْ لَهُمْ شِرْكٌ فِي السَّمَوَاتِ أَتُتَوَىٰ بِكُتُبٍ مِّنْ قَبْلِ هَذَا أَوْ أَثَرَةٍ مِّنْ عِلْمٍ إِن كُنتُمْ صَادِقِينَ

5. Wax ka dulmi badan ma jiro ruux baryi Eebe ka sokow waxaan ajiibeynin (maqleyn) tan iyo qiyaamada, baryadoodana halmaansan (ogeyn).

وَمَنْ أَسْأَلْ مِمَّنْ يَدْعُونَ مِن دُونِ اللَّهِ مَن لَّا يَسْتَجِيبُ لَهُ إِلَىٰ يَوْمِ الْقِيَامَةِ وَهُمْ عَن دُعَائِهِمْ غَفْلُونَ

6. Marka dadka la soo kulmiyana u noqon doona kuwii caabudi jiray col, Inay caabudi jireenna dafiri.

وَإِذَا حُشِرَ النَّاسُ كَانُوا لَهُمْ أَعْدَاءً وَكَانُوا بِعِبَادَتِهِمْ كَافِرِينَ

Quraanka Eebeheenna wayn yaa soo dajiyay, cirka, Dhulka iyo Khalqiga kale ee badanba Eebaa abuuray, Si Ruux walba looga abaal mariyo wuxuu camal falay muddadu noolaa, wax Eebe la wadaaga milkigiisa iyo awoodiisana ma jiro, wax in lala caabudo ama lala baryana ma bannaana, xaqna ma aha, Ruuxa waxaan Eebe ahayn caabuda ama baryana maalinta qiyaame ee kulanka wax uma taro, wuuna dafiraa. Al-Axqaaf (1-6).

7. Marka gaalada lagu dul akhriyo aayaadkannaga (quraanka) oo cad waxay dhahaan kuwa gaalada ah markuu u yimid xaqu kani waa sixir cad.

وَإِذَا تَشَاءُ عَلَيْهِمْ إِيْتَانَا يَسْتَبِقُونَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِلْحَيِّ
لَمَّا جَاءَهُمْ هَذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧﴾

8. Waxay dhihi waa been uu abuurtay (Nabigu), Waxaad dhahdaa haddaan been abuurto waxba iigama taraysaan Eebe xaggiisa, isagaana og waxaad dhumbanaysaan (oo been ah), Eebbaana marag ugu filan dhexdeenna, waana dambi dhaafe naxariista ah.

أَمْ يَقُولُونَ أَفَنَمُرَّةٌ قُلُوبُ الَّذِينَ أَفْرَقْتُمْهُمْ فَلَا تَمْلِكُونَ لِي مِثْرًا
اللَّهُ سَيَقُولُ مَا تَقُولُونَ بِمَا تَقْضُونَ فِيهِ كَلْفًا بِهِ شَهِيدًا
بَنِي وَبَنِيكُمْ وَهُوَ الْعَمُورُ الرَّحِيمُ ﴿٨﴾

9. Waxaad dhahdaa ma ihi bidci ka gaar ah Rasuullada, mana ogi waxa lagu fali aniga iyo idinka, waxaan uun raaci waxa lay waxyoodo (ee quraanka ah) waxaana ahay u dige cad (oo muuqda).

قُلْ مَا كُنْتُ بِدَاعٍ مِنَ الرُّسُلِ وَمَا أَدْرَى مَا يَفْعَلُونَ
وَلَا يَكُونُ الْبَتِّعُ إِلَّا مَوْجُوعًا إِلَىٰ وَمَا أَنَا إِلَّا لَدَيْرٌ
مُّبِينٌ ﴿٩﴾

10. Waxaad Dhahdaa bal ii warrama hadduu Quraanku Eebe ka soo dagay ood ka gaalowdaan oo uu ka marag furo marag ree Banii'israa'iil ah isaga oo kale (xaqnimada iyo runta) oo uu rumeeyay idinkuna aad is kibriiseen, Eebana ma hanuuniyo kuwa dulmilowga ah.

قُلْ آرَاءَ بَشَرَةٍ إِنْ كَانَ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ وَكَفَرْتُمْ بِهِ وَشَهِدَ
شَاهِدٌ مِنْ بَنِي إِسْرَائِيلَ عَلَىٰ مِثْلِهِ فَتَمَنَّوْا وَأَسْتَكْبَرُوا
إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْفَاسِقِينَ ﴿١٠﴾

Quraanku waa xaqu sagan oo Eebe u soo dhiibay, malaku-jibriil, kuna soo dajiyay Nabiga Muxammad ah (ammaan iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). mana aha wararkii dadkii hore oo la soo uruuriyay, siday gaalada xaqu diidayaasha ah sheegteen, Sixirna ma aha iyo wax la been abuurtay, Nabiguna jebkiisa kama keenin, siduu Eebaba aayada badan ku caddeeyay, maragna waxaa ugu filan Nabiga Eebaha wayn ee naxariista badan, Nabiguna wax gaar ah oo hor leh oon toosnayn lama imaannin, ee wuxuu raaci wixii Eebe u waxyooday.

Waxaa Quraanka u marag furay oo rumeeyay culimo ka mid ah ree Banii-israa'iil, Siday u rumeeyeen Kitaab-koodii, inkastood idinku ka gaalowdeen isna kibriiseen. Al-Axqaaf (7-10).

11. Gaaladii waxay dheheen hadduu Quraanku khayr yahay Mu'miniintu noogama hormareen rumayntiisa, madaama aanay ku hanuunin Quraankan yay gaaladu dhihi kan (Quraanka) waa beenihi hore.

وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا لِلَّذِينَ آمَنُوا لَوْ كَانَ حَقًّا
مَا سَبَغُونَا إِلَيْهِ وَإِذْ لَمْ يَهْتَدُوا بِهِ فَسَيَقُولُونَ هَذَا
إِفْكٌ قَدِيمٌ ﴿١١﴾

12. Quraanka waxaa ka horreeyay

وَمَنْ قَبْلِهِ كَتَبَتْ مُوسَىٰ إِمَامًا وَرَحْمَةً وَهَذَا

kitaabkii (Nabi) Muuse, isagoo ah hanuuniye iyo naxariis, kanna waa kitaab u rumayn (xaqa). Af carabina ku soo dagay, si uu ugu digo kuwa dulmiga falay, uguna bishaareeyo kuwa wanaagga falay.

كَتَبَ مُصَدِّقٌ لِّسَانَ عَرَبِيًّا يُنذِرُ الَّذِينَ ظَلَمُوا
وَيُسِّرُ لِلْمُحْسِنِينَ ﴿١٢﴾

13. Kuwa yidhi Eebahanno waa Alle haddana toosnaaday cabsi iyo murugi midna ma arkaan.

إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّهُ ثُمَّ اسْتَقَمُوا فَلَا خَوْفٌ
عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿١٣﴾

14. Kuwaasna waa ehlu-Janno wayna ku waari dhexdeeda, abaalmarin camalkoodii (wanaagsanaa) darteed.

أُولَئِكَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ خَالِدِينَ فِيهَا جَزَاءً بِمَا كَانُوا
يَعْمَلُونَ ﴿١٤﴾

Xaqa rumayntiisa ruuxna gaar uma aha, ee ciddii Eebe waafajiyoo oo hanuunka doonta yaa hanuuna, Sida ay gaaladu dheheenna xaalku ma aha, oo ah in Ruuxa xoolaha badan ama madaxda ah uu ku xaqleeyahay inuu wax walba ugu horreeyo, xataa hanuunkaba.

Quraankuna ma aha kii ugu horreeyay kutubta Eebe ee waxaa hortiiisa ahaa Tawreeddii Nabi-muuse ee wanaagsanayd, iyo kutubihii kale ee Eebe, Quraankuna wuxuu ku soo dagay luqada carabiga ah si uu ugu digo kuwa leexday, uguna bishaareeyo kuwa wanaagga fala, ruuxiise Eebe Aqoonsada haddana toosnaada cabsi iyo murugo midna ma qabato Maalinta Qiyaame, Jannana wuu gali isagoo ku waari camalkiisa wanaagsan dartiis. Al-Axqaaf (11-14).

15. Dadka waxaan u dardaarannay labadiisii Waalid inuu u wanaag falo, Hooyadiis uurkay ku sidday iyadoo dhibban wayna dhashay iyadoo dhibban, uurkiisa iyo gudhintiisuna waa Soddon bilood, markuu ilmihii tabar yeesho oo Afartan gaadho yuu (kan fiican) dhahaa: Rabbow igu toosi inaan kugu mahadiyo nicmadaada aad iigu nicmaysay Aniga iyo waaliddiintay, iguna toosi inaan camal fiican ood ka raalli tahay falo, iina wanaaji faracayga, waana kuu toobadkeenaye, waxaana ka mid ahay muslimiinta.

وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ إِحْسَانًا حَمَلَتْهُ أُمُّهُ كُرْهًا
وَوَضَعَتْهُ كُرْهًا وَحَمَلُهُ وَفِصْلُهُ ثَلَاثُونَ شَهْرًا حَتَّىٰ إِذَا
بَلَغَ أَشُدَّهُ وَبَلَغَ أَرْبَعِينَ سَنَةً قَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِي أَنْ
أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ الَّتِي أَنْعَمْتَ عَلَيَّ وَعَلَىٰ وَالِدَيَّ وَأَنْ أَعْمَلَ
صَالِحًا تَرْضَاهُ وَأَصْلِحْ لِي فِي ذُرِّيَّتِي إِنِّي بُدِّئْتُ إِلَيْكَ
وَأَنَا مِنَ الْمُسْلِمِينَ ﴿١٥﴾

16. Kuwaasi waa kuwaannu ka aqbalayno camalkoodi fiicnaa, kana dhaafayno koodii xumaa, waxayna noqon ehlu-Janno, Eebana wuxuu u yaboohay yabooh run ah.

أُولَئِكَ الَّذِينَ نَقَبَلُ عَنْهُمْ أَحْسَنَ مَا عَمِلُوا
وَوَتَجَاوَزُنَّ سَنَائِهِمْ فِي أَصْحَابِ الْجَنَّةِ وَعَدَّ
الصِّدْقَ الَّذِي كَانُوا وَعَدُودًا ﴿١٦﴾

Waalidka xaqiisu aad buu u wayn yahay, Eebana in badan yuu quraanka ku soo celceliyay sida Aayadahan oo kale, meelo badanna wuxuu Eebe la xidhiidhiyay cibaadadiisa, Si gaar ahna wuxuu u xusay Hooyada, maxaa yeelay waxay la kulantaa dhib badan xagga uurka iyo xagga dhalmada iyo nuujintaba, Saas daraadeed ilmaha wanaagsan wuu u sama falaa, isagoo Eebe warsan inuu waafajiyo mahaddiisa, siduu ugu sama falay isaga iyo waalidkiisba, una fududeeyo inuu camal fican falu, Faraciisana u suubbiyo, Ruuxa saas yeelana waa midka Eebe wanaagga ka aqbalo, xumaantana ka dhaafo Janno iyo wanaagna ku abaal mariyo. Al-Axqaaf (15-16).

17. Waxaa jira mid ku dhihi labadiisii waalid Ufbaa la idin yidhi ee ma waxaad ii yaboohaysaan in la i soo bixin iyadoo dadkii horaba tagay, Labada waalidna ay Eebe uga baryi (hanuun), iyagoo ku dhihi magacaa ba'; ee rumee, ballanqaadka Eebana waa xaqe, oo markaas ku dhihi waxaasi waa beentii dadkii hore.

وَالَّذِي قَالَ لَوْلَاذِيهِ أَفِي لَكُمْ أَنْتَ ادْنَيْتَنِي أَنْ أُخْرَجَ وَقَدْ خَلَّيْتُ الْقُرُونُ مِنْ قَبْلِي وَهُمَا يَسْتَفِيدَانِ اللَّهَ وَرَبِّكَ
ءَايَمِنَنَّ وَعَدَّ اللَّهُ حَقَّ قَوْلِهِ مَا هَذَا إِلَّا أُسْطُورٌ
الْأُولَى ١٧

18. Kuwaasi waa kuwa caddibaadi u sugnaatay, iyagoo ka mid noqon kuwii horay u tagey oo Jinni iyo Insiba leh, waxayna ahaayeen kuwa khasaaray.

أُولَئِكَ الَّذِينَ حَقَّ عَلَيْهِمُ الْقَوْلُ فِي أُمَمٍ قَدْ خَلَّيْتُ مِنْ
قَبْلِهِمْ مِنَ الْجِنِّ وَالْإِنْسِ إِنَّهُمْ كَانُوا خَاسِرِينَ ١٨

19. Cid walba waxay mudan waxay camal fashay Eebana wuu u oofin camalkooda iyagoon la dulmiyaynin.

وَلِكُلِّ دَرَجَةٍ مِمَّا عَمِلُوا أُوتِيَ فِيهِمْ أَعْمَالُهُمْ وَهُمْ
لِأَبْظَامُونٍ ١٩

Waalidka xaqiisa waxaa sheegay Aayado badan, waxaana inoo soo hor maray ilmihii baariga u ahaa Waalidkii xaalkiisa, Aayadahanna waxay caddayn xumaanta caaqnimada iyo caasiyidda Waalidka, iyo in Ruuxii Waalidkiis caasiya, xumaan, Eeba khilaafeed, qiyaamo inkirid iyo baadinnimoba uu u dhawyahay, kuwa saas yeelana waa kuwa naartu u waajibtay oo kahsaarana ku dhacay, illeen Ruux walba Eebe wuxuu ka abaal marin wuxuu camal falay wanaag iyo xumaaanba. Al-Axqaaf (17-19).

20. (Xusuuso) maalinta kuwii gaaloo-bay loo bandhigi Naarta, iyagoo lagu dhihi waxaad wanaaggiinii ku dhamaysateen noloshiinnii dhawayd, waadna ku raaxaysateen, maantase waxaa laydinku abaal marin caddibaad dulli ah. iskibrintiinnii aad xaq darro isula weeyneeydeen iyo faasiqnimadiinna darteed.

وَيَوْمَ يُعْرَضُ الَّذِينَ كَفَرُوا عَلَى النَّارِ أَلَّذِينَ ظَنَنْتُمْ أَنَّكُمْ
حَيَاتُكُمْ أَلَدُنْيَا وَأَنْتُمْ مُعْتَمِرُونَ عَذَابُ
الْهُونِ بِمَا كُنْتُمْ تَسْتَكْبِرُونَ فِي الْأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ
وَبِمَا كُنْتُمْ تَفْسُقُونَ ٢٠

21. Xusuuso Ree caad walaalkood (Nabi huud) markuu u digay qoomkiisii iyagoo daggan Axqaaf, iyagoo Rasuul-

* وَأَذْكُرُ الْخَاسِرِينَ إِذْ أَنْذَرْتَهُمْ, يَا الْأَحْقَافِ وَقَدْ
خَلَّيْتُ النَّدْرُ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا

lo wax u diga ka horreeyeen kana dambeeyeen, isagoo ku dhihi: Allaah mooyee wax kale ha caabudina, waxaan idiinka yaabi caddibaad maalin wayn.

اللَّهُ إِنِّي أَخَافُ عَلَيْكَ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١١﴾

22. Waxay ku dheheen ma waxaad noola timid inaad naga iisho Ilaahya-dannada, noo keen waxaad noogu goodiyayso haddaad run sheegeyso.

قَالُوا أَجِئْنَا بِتِلْكَ أَعْنَافٍ الْهَيْبَتِ قَاتِنًا يَمَاعِدُ تَائِبًا
كُنتَ مِنَ الصَّادِقِينَ ﴿١٢﴾

23. Wuxuuna ku yidhi Eebaa ku cilmi leh (goorta caddibaaddiinna) ee anugu waxaan idin gaadhsiin waxa lay faray inaan gaadhsiiyo, waxaanse idinku arkaa kuwa jaahiliin ah.

قَالَ إِنَّمَا الْعِلْمُ عِنْدَ اللَّهِ وَإِن لَّيُفَكَّرُ مَا أُرْسِلْتُ بِهِ
وَلَكِنِّي أُرَكِّبُكُمْ قَوْمًا يَجْهَلُونَ ﴿١٣﴾

Raaxo Adduun oo caddibaadi ka dambayso wax ma tarto, Ruuxiise gaalnimo, kibir iyo xaq diidnimo ku Kaca waxaa lagu abaal-marin Aakhiro caddibaad.

Aayadaha kale waxay ka qisoon qoom la dhihi jiray Ree Caad oo loo diray Nabi Huud, beeniyeenna markuu xaqa ugu yeedhay iyo in Eebe kaliya ay caabudaan, kana digtoonaadaan caddibaad daran, wayse madax adaygeen, waxayna u caddeeyeen inayan marna ilaahyaalkooda ka tagaynin, ee wuxuu keeni ha keeno, Eebase wax walba og awoodna leh, hadalladaas oo kalana waxaa ku hadla jaahiliinta isla wayn. Al-Axqaaf (20-23).

24. Markay Gaaladii Reer caad arkeen caddibaaddii (Sida daruur) oo Toggooda soo qaabishay waxay dheheen waa Daruur na waraabinaysa, Ma aha ee waa waxaad dadajisanayseen inuu yimaaddo oo caddibaad ah, waana dabayl caddibaad darani ku jirto.

فَمَا زَاوَاهُ عَارِضًا مُّسْتَقْبِلَ أُوْدِيِّهِمْ قَالُوا هَذَا
عَارِضٌ مُّطِرٌ تَأْتِلُ هُوَمَا أَسْتَجِلُّنَّ بِهِ يَوْمَ نَجِي فِيهَا
عَذَابُ الْبِئْسَ ﴿١٤﴾

25. Wax kasta oy martana way burburin amarka Eebe dartiis, markaasay ahaadeen kuwa aan la arkaynin Guryo-hoodii mooyee, saasaana ku abaal marinnaa kuwa dambiiilayaasha ah.

تَذْمُرُ كُلُّ شَيْءٍ بِأَمْرِ رَبِّهَا فَأَصْبَحُوا لَا يُرَى إِلَّا
مَسْكَنُهُمْ كَذَلِكَ نَجْزِي الْقَوْمَ الْمُجْرِمِينَ ﴿١٥﴾

26. Waxaan makaninnay (siinnay) Ree caad wax aannaan idin makaninnin, waxaana u yeellay maqal, arag iyo Quluub, waxbase uma tarin Maqalkoodii, Aragoodii iyo Quluubtoodii, Ma-xaayeelay Waxay diidayeen Aayaadka Eebe, waxaana ku dhacay (oo koobay) caddibaadii ay ku jeesjeesayeen.

وَلَقَدْ مَكَنَّا هُمَ فِيمَا إِن مَكَكُ فِيهِ وَصَعَلْنَا لَهُمْ
سَمْعًا وَأَنْصُرًا وَأَفْعِدَةً فَمَا أَغْنَى عَنْهُمْ سَمْعُهُمْ
وَلَا أَبْصَرُهُمْ وَلَا أَفْعِدَتُهُمْ مِنْ شَيْءٍ إِذْ كَانُوا يَجْحَدُونَ
بِعَايَاتِ اللَّهِ وَحَاقَ بِهِمْ مَا كَانُوا بِهِ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿١٦﴾

Gaaladii Ree Caad way kibreen waxayna beeniyeen Nabigii Eebe ee Huud ahaa, Markaasaa Eebe ku halaagay Caddibaad Dabayleed oo Naari ku dhex jirto, iyagoo Roob mooday Dabayshaasoo baabi'isay halaagtayna, saas oo kalana waxaa mudan Ciddii isla waynaata, oo Gaalawda dhammaanteed, cid dhuntayna maqal, Arag iyo Qalbi wax uma taro, saas daraaddeed waa in lagu waana qaato Qisadan, Eebana lagu xidhannado illeen xoog iyo quwad cidna agtiisa wax uma tartee. Al-Axqaaf (24-26).

27. Waxaan halaagnay wixii gaarakiin-na ahaa oo Magaalooyin ah, xujooyin-kana waan caddaynay si dadku Eebe ugu noqdo.

وَلَقَدْ أَهَلَكْنَا مَا حَوْلَكُمْ مِنَ الْقَرْيَةِ وَصَرَفْنَا
الْآيَاتِ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٢٧﴾

28. Maxay ugu gargaari waayeen ku-way ilaahyaal ay u dhawaadaan ka dhigteen Eebe ka sokow, way ka dhumeen, taasina waa beentoodii iyo war abuurashadoodii.

فَلَوْلَا نَصْرُهُمُ الَّذِينَ اتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللَّهِ
قُرْبَانًا لِلَّهِ لَبَدَّلْنَا صَوْنَهُمْ وَذَلِكَ إِفْكُهُمْ
وَمَا كَانُوا بِفِتْرَتٍ ﴿٢٨﴾

29. Xusuuso markaan kuu soo iilnay koox Jinni ah oo Quraanka dhagaysan, markay yimaadeen (meesha lagu akh-riyina) ay isu dheheen dhagaysta, mar-kii la dhammeeyayna ay ciddoodii ku noqdeen iyagoo u digi.

وَلَا صَرَفْنَا إِلَيْكَ نَفَرًا مِنَ الْجِنِّ يَسْتَمِعُونَ
الْقُرْآنَ فَلَمَّا حَضَرُوهُ قَالُوا أَنصَبُوا لِمَا نَصَبُوا لَوْلَا
إِلَى قَوْمِهِمْ مُنذِرَاتٌ ﴿٢٩﴾

30. Oo ku dhihi qoomkannow waxaan maqallay Kitaab (Quraan) la soo da-jiyay (Nabi) Muuse ka dib oo rumayn Kitaabihii ka horreeyey, kuna hanuunin xaq iyo waddada toosan.

قَالُوا يَا قَوْمَنَا إِنَّا سَمِعْنَا كِتَابًا أُنزِلَ مِنْ بَعْدِ
مُوسَىٰ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ يَهْدِي إِلَى الْحَقِّ وَإِلَى
طَرِيقٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿٣٠﴾

31. Qoomkannow ajiiba (raaca) uyeed-haha xaqa Eebe, rumeeyana, dambi-giinna Eebe ha dhaafee, hana idinka koriyo caddibaad darane.

يَقَوْمَنَا أَجِيبُوا دَاعِيَ اللَّهِ وَآمِنُوا بِهِ يَغْفِرَ لَكُمْ
مِن ذُنُوبِكُمْ وَيُجْزِكُمْ مِّنْ عَذَابِ آلِيمٍ ﴿٣١﴾

32. Ruuxaan ajiibin (raacin) uyeedhaha Eebe kuma daaliyo Eebe dhulka dhex-diisa (kama cararo) wax Eebe ka soo hadhay oo u gargaarina ma jiro, ku-waas «aan maqlaynin yeedhidda Eebana» waa kuwa baadi cad ku sugan.

وَمَنْ لَا يُجِيبْ دَاعِيَ اللَّهِ فَلَيْسَ بِمُعْجِزٍ فِي الْأَرْضِ
وَلَيْسَ لَهُ مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءُ أُولَٰئِكَ فِي ضَلَالٍ
مُّبِينٍ ﴿٣٢﴾

Labada Aayadood ee hore waxay ka warrami sida Eebe u halaagay gaaladii kibirtay ee Maka agdagnayd, ilaahyadoodii Eebe ka soo hadhayna ayna wax u tarin, Ilaahayna saasuu u karaa inuu xaq diidayaasha u halaago.

Aayadaha kale waxay ka qisoon in Nabiga Muxammad ah (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Loo diray Jinni iyo insiba, ayna koox Jinni ah maqashay isagoo Quraanka akhriin dhagaysteenna rumeeyenna. Al-Axqaaf (27-32).

33. Miyeeyna ogayn Eebaha abuuray Samaawaadka iyo dhulka aan kana noogin abuurkooda inuu karo inuu soo nooleyo wixii dhintay, saas ma aha, ee Eebe wax walba wuu karaa.

أُولَئِكَ يَوْمَئِذٍ يَخْلَقُهُمْ يُقَدِّرُ عَلَىٰ أَن يَحْيِيَ الْمَوْتَىٰ بَلَىٰ إِنَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٣٣﴾

34. Maalinta kuwii gaaloobay loo bandhigi Naarta waxaa lagu odhan Miyuuna xaq ahayn kan (caddibaadda ah) markaasay dhahaan Eebaan ku dhaarannaye waa xaq, Eebe wuxuu ku dhahaa dhadhamiya caddibaadda Gaalnimadiinna darteed.

وَيَوْمَ يُعْرَضُ الَّذِينَ كَفَرُوا عَلَى النَّارِ أَلَيْسَ هَذَا بِالْحَقِّ قَالُوا بَلَىٰ وَرَبِّنَا قَالَ فَذُقُوا الْعَذَابَ بِمَا كُنتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿٣٤﴾

35. U samir siday u samreen kuwii sugnaanta iyo niyadda u saaxiibka ahaa ee rasuullada ahaa, hana ku dagdagin in la caddibo waxay la midnoqon markay arkaan waxa loogu gooddiyay ineeyan ku nagaannin Adduunka Saacad maa-lin ah waxaan ahayn, Quraankuna waa gaadhsiin, kuwa faasiqiinta ah umbaana la halaagaa.

فَأَصْبِرْ كَمَا صَبَرْنَا أُولُو الْعُرْسِ مِنَ الرُّسُلِ وَلَا تَسْتَعْجِلْ لَهُمْ كَأَنَّهُمْ يَوْمَ يَرَوْنَ مَا يُوعَدُونَ لَمْ يَلْبَسُوا إِلَّا سَاعَةَ مِنْ نَارٍ فَبَلَّغْ فَهَلْ تُهْلِكُ إِلَّا الْقَوْمَ الْفَاسِقُونَ ﴿٣٥﴾

Ilaaheen isagaa wax walba abuuray, wax daaliya ama cajis galiyana ma jiro, soo bixinta dadkuna way u fuddahay, Maalinta gaalada Naarta la horkeenana waxay qiran xumaantoodii ay ku faleen Adduunka, waxaana lagu abaalmarin caddibaad, waxaase laga rabaa Ruuxa Muslimka ah sabir, adkaysi iyo xaq ku sugnaansho, sida Eebe faray Rasuulladiisuna ahaayeen, Quraankuna waa digniin Eebe iyo war cad iyo gaadhsiin caalamka oo dhan, Inkastoo Ruuxu ku raaxaysto Adduunyada ama ku raagaba waxay la mid noqon isagoon ku nagaannin mudda yar mooyeene. Al-Axqaaf (33-35).



Suurat Muxammad

سُورَةُ مُحَمَّدٍ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. kuwii Gaalobay oo jidka Eebana ka leexiyay Dadka Eebe waa buriyay camalkooda.

الَّذِينَ كَفَرُوا وَصَدُّوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ أَضَلَّ أَعْمَالَهُمْ ﴿١﴾

2. kuwa rumeeyay xaqase oo camal fiican falay oo rumeeyay Quraanka lagu soo dajiyay (Nabiga) Muxammad ah ee xaqah Eebe wuu asturi xumaantooda, xaalkoodana wuu wanaajin.

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَآمَنُوا بِمَا نُزِّلَ عَلَيْنَا مِنْ كِتَابِ رَبِّهِمْ كَرِهَتْ أَسْمَاءُ سَبِيحَتِهِمْ وَأَضْلَحَ بِهَا لَهْمَهُمْ ﴿٢﴾

3. saasna waxaa ugu wacan in kuwa Gaalobayna ay raaceen Baadhil, kuwa rumeeyayna ay raaceen xaqah Eebe, saasuuna Eebe u yeelaa tusaale.

ذَلِكَ بِأَنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا اتَّبَعُوا الْبَاطِلَ وَأَنَّ الَّذِينَ آمَنُوا اتَّبَعُوا الْحَقَّ مِنْ رَبِّهِمْ كَذَلِكَ يَضْرِبُ اللَّهُ لِلنَّاسِ أَمْثَلَهُمْ ﴿٣﴾

4. Haddaad kula kulantaan Gaalada Dagaal Luqunta ka garaaca, markaad sugtaanna ku adkeeya xidhidda, markaas ama iska sii daaya ama haysurfurteen, inta Dagaalku ka xasili, xaalku waa saas, hadduu Eebe doonana wuu ka aarsankaraa, hase yeeshee wuxuu saas u falay inuu qaarkiin qaarka kale ku imtixaano, kuwa Jidka Eebe lagu dilana Camalkooda Eebe ma halleeyo.

فَإِذَا الْقِيَمَةُ الَّذِينَ كَفَرُوا فَضْرَبَ الرِّقَابِ حَتَّىٰ إِذَا أَغْنَسْتُمُوهُمْ فَشُدُّوا أُلُوفًا فِيمَا مَتَابَعُدُّوهُمَا وَإِنَّمَا يَضَعُ كَلْبُ الرِّقَابِ أَوْ رَأْسًا ذَلِكَ وَلَوْ يَشَاءُ اللَّهُ لَانتَصَرْتُمْ وَهُمْ وَلَكِنْ لِيَسْلُوْا بَعْضُكُمْ بِبَعْضٍ وَالَّذِينَ قَاتَلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَلَنْ يُضِلَّ أَعْمَالَهُمْ ﴿٤﴾

5. Eebana wuu toosin oo hanuunin kuwaas, wuuna wanaajin xaalkooda.

سَيَهْدِيَهُمْ وَيُضِلُّهُمُ اللَّهُ بِأَعْمَالِهِمْ ﴿٥﴾

6. Wuxuuna galin Janno (uu baray) u caddeeyay.

وَيُدْخِلُهُمُ الْجَنَّةَ عَرَضًا هَمَّتْ ﴿٦﴾

Gaaladii Nabiga ka Gaalowday xaqana dadka u diidday camlkoodu wuu buri, sida kuwa Nabiga rumeeya Camal fiicanna fala Dambigooda loo dhaafto, Maxaa yeelay isku mid ma noqon karaan Ruux xaqah raacay oo dadka faray iyo mid Gaalobay Dadkana xaqah ka reebay, Tan kale wuxuu Eebe farayaa mu'iniinta inay ku Jihaadaan Jidka Eebe, Gaaladana isaga caabbiyaan si daran, Jahaadkuna waa imtixaan Eebe, Ciddii ku dhimatana waa ehlu-Janno hadii kalana waxay heli Guul iyo Sharaf, saas daraaddeed yaa Ciddii Jahaadka ka tagta Dulli iyo Gumaysi u dulfuulaa. Muxammad (1-6).

7. Kuwa xaqa rumeeyow haddaad u gargaartaan Eebe (Diintiisa) isna wuu idiin gargaari, Gommadihiinnana wuu sugi (Geesinnimo).

بَنَاتِهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اِنْ تَصُرُوا لِلّٰهِ يَنْصُرْكُمْ وَيُخْرِجَنَّ
اَقْدَامَكُمْ ﴿٧﴾

8. Kuwa Gaalobayse Halaag iyo (hoos u dhac) yaa u sugnaaday, Camalkoodiina Eebe wuu halleeyay.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا فَعَسَا ءُهْمُهُمْ وَاصْلُ اَعْمَالِهِمْ ﴿٨﴾

9. Saas waxaa ugu wacan inay neceen waxa Eebe soo dajiyay oo xaqa ah, markaasuu hoobiyay Camlkoodii.

ذٰلِكَ بِاَنَّهُمْ كَفَرُوْهُمَا اَنْزَلَ اللّٰهُ فَاحْطَبُ اَعْمَالِهِمْ ﴿٩﴾

10. Miyayna ku soconin dhulka oo markaas ay arkaan siday noqotay Cidhibtii kuwii Gaalobay ee Ree Maka ka horreeyay, Eebaa halaagay, Gaaladana waxaa u sugnaaday saasoo kale halaag.

* اَفَلَمْ يَسِيرُوْا فِي الْاَرْضِ فَيَنْظُرُوْا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الَّذِيْنَ
مِنْ قَبْلِهِمْ دَمَّرَ اللّٰهُ عَلَيْهِمْ ۗ وَاللّٰكْفِرِيْنَ اَمْثَلَهَا ﴿١٠﴾

11. Saas waxaa ugu wacan in Eebe yahay gargaaraha Mu'miniinta, Gaaladuna ayna gargaare lahayn.

ذٰلِكَ بِاَنَّ اللّٰهَ مَوْلَى الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا وَاَنَّ الْكٰفِرِيْنَ
لَا مَوْلَى لَهُمْ ﴿١١﴾

12. Eebe wuxuu galin Mu'miniinta Camalka fiicanna falay Jannooyin ay dureeri dhexdeeda Wabiyaal, kuwa Gaalobayna way raaxaysan (Adduunka) una cuni sida xooluhu wax u cunaan, Naarna waa Gurigay ku hoyan.

اِنَّ اللّٰهَ يُدْخِلُ الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا وَعَمِلُوا الصّٰلِحٰتِ جَنَّٰتٍ
تَجْرِيْ مِنْ تَحْتِهَا الْاَنْهٰرُ ۗ وَالَّذِيْنَ كَفَرُوْا يَسْتَوُوْنَ ۗ وَاَيُّكُمْ
كَمَا تَأْكُلُ الْاَفْعٰمُ وَالنّٰارُ مَتَوًى لَهُمْ ﴿١٢﴾

Eebe Dadka gargaar ugama baahna ee imtixaan dartii yuu u falay saas, Ciddiise Diinta Eebe difaacda wuu u gargaaraa, Gaaladana dulli iyo halaag yaa u dambayn, Maxaa yeelay waa xaq diidayaal, waana Ruuxu dhulka inuu maraa kuna waana-qaato wixii dhacay, Tan kale waa in Mu'miniintu rumeeyaan in Eebe u gargaari hadday la yimaaddaan niyad san, midnimo, toosni iyo xaq daaficid, Taasina waxay ka muuqataa siduu Eebe ugargaaray Nabigii (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelce) iyo asxaabtiisii, mudda yar kadibna diinta islaamku meel walba ku faaftay kana talisay, intaas waxaa u dheer Jannada Aakharo, Maxayse tari in sida xoolaha wax loo cuno mar hadday naaru Ka dambayso. Muxammad (7-12).

13. Immisay jirtay Magaalo ka xoog badan Magaaladaadan ku bixisay (Maka) aanna hallignay, gargaarana aan helin.

وَكَانَ مِنْ قَوْمِهِ هِيَ اَشَدُّ قُوَّةً مِنْ قَوْمِكَ اَلَيْسَ اَحْرَجْتِكَ
اَهْلَكَ كَيْفَ فَلَا تَأْوِيْلَ لَهُمْ ﴿١٣﴾

14. Ruux xaqa cad ee Eebe ku sugan ma

اَفَمَنْ كَانَ عَلَىٰ يَتِيْمَةٍ مِنْ رَبِّهِ كَمَنْ زُوِّنَ لَهُ سُوْءُ عَمَلِهٖ

la midbaa Ruux loo qurxiyay Camal-kiisa xun oo haddana waxa naftiisu jeceshahay (ee xun) raaca.

وَاتَّبِعُوا أَهْوَاءَهُمْ ﴿١٤﴾

15. Tilmaanta Jannada loogu yaboohay mu'miniinta waa in Wabiyaal biya ah oon doorsoomaynin dhexdeeda yihiin, iyo Wabiyaal Caano ah oon iyana dhadhankoodu doorsoomaynin, iyo Wabiyaal Khamro (xalaal ah) oo u macaan dadka cabbi, iyo Wabiyaal Malab ah oo la sifeeyay, waxayna Jannada ku leeyihiin nooc kasta oo-Midho ah, iyo dambidhaafka Eebe.

مَثَلُ الْجَنَّةِ الَّتِي وَعَدَ الْمُتَّقُونَ فِيهَا أَنْهَارٌ مِنْ مَاءٍ غَيْرِ آسِنٍ وَأَنْهَارٌ مِنْ لَبَنٍ لَوِيضٍ طَعْمُهُ وَأَنْهَارٌ مِنْ خَمْرٍ لَذَّةٍ لِلشَّارِبِينَ وَأَنْهَارٌ مِنْ عَسَلٍ مُصَفًّى وَلَهُمْ فِيهَا مِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ وَمَغْفِرَةٌ مِنْ رَبِّهِمْ مَنْ هُوَ خَالِدٌ فِي النَّارِ وَسُقُوا مَاءً حَمِيمًا فَقَطَّعَ أَمْعَاءَهُمْ ﴿١٥﴾

Ma la midbaa Ruux Naarta ku waari lagana waraabin Biyo kulayl daran oo Xiidmahooda gooya.

16. Waxaa ka mid ah Gaalada kuwo ku dhagaysan (Nabiyow), Markay agtaada ka baxaanna ku dhihi kuwa Cilmiga leh (Asxaabta) Muxuu lahaa dhawaan, kuwaasi waa kuwa Eebe daabacay (ka dhigay midaan wax fahmayn) Quluubtooda, waxay naftoodu jeclaydna (oo xunna) raacay.

وَمِنْهُمْ مَنْ يَسْمَعُ إِلَيْكَ حَتَّى إِذَا خَرَجُوا مِنْ عِنْدِكَ قَالُوا لِلَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ مَاذَا قَالَ آنِفًا أُولَئِكَ الَّذِينَ طَعِبَ اللَّهُ عَلَى قُلُوبِهِمْ وَاتَّبَعُوا أَهْوَاءَهُمْ ﴿١٦﴾

Xoog Eebaa iska leh, xaq diide kastana Eebe wax kuma aha inuu halligo sidii kwii horeba uu ku falay, Xaq iyo baadiina isku mid ma aha. Jannada Eebe u darbay Mu'miniinta ee wanaaggu ku dhanyahay iyo naar daranna ma sinna, Eebeheenna dadka ma dulmiyo ee Ruux walba wuxuu falo yuu ka abaal mariyaa, Samaan iyo xumaanba, Quraanka iyo xaqa oo lagu jeesjeeso waa ficilka Gaalada iyo xumaanloowga ee waa in layska jiraa. Muxammad (13-16).

17. Kuwa hanuunay (Eebe) wuxuu u siyaadiyaa hanuun, wuxuuna waafajiyaa (Eebe) kayaabiddiisa.

وَالَّذِينَ هَتَدُوا رَبَّهُمْ هَدَىٰ وَآتَيْنَاهُمْ ثَوَابَهُمْ ﴿١٧﴾

18. Gaaladu ma waxay sugi in Qiyaa-madu kado ugu timaaddo, waxaase yimidba Calaamooyinkeedii, ee sideebay xusuus ugu sugnaan hadday Qiyaa-madu timaaddo.

فَمَنْ يَنْظُرُونَ إِلَّا السَّاعَةَ أَنْ تَأْتِيَهُمْ بَغْتَةً فَقَدْ جَاءَ أَشْرَاطُهَا فَأَنَّى لَهُمْ إِذَا جَاءَهُمْ نَهْمٌ ذَكَرْتَهُمْ ﴿١٨﴾

19. Ogow (kuna sugnow Nabiyow) inaan ku xaq lugu caabudaa Jirin Allaah mooyee, una dambi dhaaf way-

فَاتَّعَمَتْ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَسْتَغْفِرُ لِدُنْيِكَ وَالْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مُتَقَلَّبَكُمْ

dii naftaada iyo mu'miniinta Rag iyo Haweenba, Eebana waa ogyahay dhaqdhaqaaqiinna iyo nagaadigiinnaba.

وَمَوَدَّةٍ ۝١٠

20. Waxay kuwa xaqa rumeeyay dhaahan Maa la soo dejiyo Suurad, markiise la soodajiyo Suurad sugan Dagaalkana (Jahaadkana) lagu sheego waxaad arkaysaa kuwa quluubta ka buka oo ku soo fiirin (Nabiyow) sida Ruux sakaraad hayo oo kale, halaag bayna mutaan kuwaasi.

وَيَقُولُ الَّذِينَ آمَنُوا لَوْلَا نَزَّلَتْ سُورَةٌ قَائِدًا
أُنزِلَتْ سُورَةٌ مُحْكَمَةٌ وَذُكِّرَ فِيهَا الْفِتَالُ
رَأَيْتَ الَّذِينَ فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ يَنْظُرُونَ إِلَيْكَ نَظَرَ
الْمَعْيُوبِ عَلَيْهِ مِنَ الْمَوْتِ فَأُولَئِكَ لَهُمْ ۝١١

21. Daacadnimo iyo hadal wanaagsan yaa u khayr roonaan lahayd, markase xaalku dhaboobo (Jahaad la galo) hadday Eebe u runsheegaan yaa u khayr badan.

طَاعَةٌ وَقَوْلٌ مَعْرُوفٌ فَإِذَا عَزَمَ الْأَمْرُ
فَلَوْ صَدَقُوا اللَّهَ لَكَانَ خَيْرًا لَهُمْ ۝١٢

Ruuxii xaqa raaciddiisa iyo Jidka Eebe ku dadaala Eebe wuxuu ku abaal mariyaa inuu u siyaadiyo hanuun, wuxuuna waafajiyaa wanaag iyo Eebe ka yaabid, Ciddii caqli lehna waa inay waqtiga ka faa'iidaysataa, maxaa yeelay Qiyaamadu waxay ku imaan kado, markay timaadaana Cidna calaacal iyo catow wax uma tarto, mar haddii fursadu dhaafto, waana in Ebe si dhab ah loo qiraa laguna sugnaado arrintaas, Dambi dhafna had iyo jeer la waydiistaa, Jidkiisana lagu toosnaadaa laguna jihaadaa, Hadal wanaagsan, Niya adag, daacadnimo iyo Eebe rumayn dhab ahna lagu dadaalo. Muxammad (17-21).

22. Amaad mudantihii haddaad xaqa (Jahaadka) ka jeedsataan inaad fasaa-disaan dhulka, Qaraabadiinnana goysaan.

فَهَلْ عَسَيْتُمْ إِنْ تَوَلَّيْتُمْ أَنْ تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ
وَتَقَطَّعُوا أَرْحَامَكُمْ ۝١٣

23. Kuwaasi waa kuwa Eebe lacnaday, dhagaha iyo Indhahana tiray.

أُولَئِكَ الَّذِينَ لَعَنَهُمُ اللَّهُ فَأَصَمَّهُمْ وَأَعَمَّى
أَبْصَارَهُمْ ۝١٤

24. Miyayna Quraanka u fiirsannin (si dhab ah) mise Quluubtoodaa daboolan.

أَفَلَا يَتَذَكَّرُونَ الْفِتْرَةَ أَنْ أَعَمَّى قُلُوبَ أَقْفَالِهَا ۝١٥

25. Kuwa riddoobay (gaalnimo ku noqday) inta xaqu iyo hanuunku u caddaaday ka dib shaydaanbaa u qurxiyay, yididiilo (been ahna) ugu yaboo-hay.

إِنَّ الَّذِينَ أُوْتُوا عَلَىٰ آدْبِهِمْ مِنْ بَعْدِ مَا
تَبَيَّنَتْ لَهُمُ الْهُدَىٰ الشَّيْطَانُ سَوَّلَ لَهُمْ وَأَمَّنَّ
لَهُمْ ۝١٦

26. Saas waxaa ugu wacan iney kuwa riddoobay ku dheheen kuwa xaqa nacay waxaan idinku (waafaqaynaa)

ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَالُوا الَّذِينَ كَفَرُوا مَا نَزَّلَ اللَّهُ
سَنُطِيعُكُمْ فِي بَعْضِ الْأَمْرِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ

adeecaynaa amarka qaarkiis (colnimada Nabiga), Eebana waa ogyahay waxay qarsan.

إِسْرَارُهُمْ ﴿٦٦﴾

27. Ee say noqon markay nafta ka qaadayso Malaa'igtu iyadoo ka garaaci Wajiga iyo gadaashaba.

فَكَيْفَ إِذَا تَوَفَّتْهُمُ الْمَلَائِكَةُ يَضْرِبُونَ
وُجُوهُهُمْ وَأَدْبُرَهُمْ ﴿٦٧﴾

28. Saas waxaa ugu wacan inay raaceen kuwaasi wax Eebe ka cadhoodo, neceenna raalli ahaanshihiisa, markaasuu buriyay camalkoodii.

ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ آتَمُوا مَا أَسْحَطَ اللَّهُ
وَكَيْفَ هُوَ أَرْضِيضُونَهُ فَأَحْبَطَ أَعْمَالَهُمْ ﴿٦٨﴾

Xaqa iyo wanaagga iyo Jihaadka oo laga jeedsado waxay sabab u noqotaa halaag iyo dhibaato, fasaadinta dhulka iyo Qaraabada oo la gooyo, kuwa saa falana waa kuwa lacnadda Eebe ku dhacdo, maqal iyo aragna aan lahayn, maxaa yeelay ma aha kuwo quraanka fiiriya, Arrintaasuna ciqaab adduun yay Leedahay Aakhira ka hor, Nabiguna (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yelee) Wuxuu yidhi (Dambi ka dhaw in Eebe Ciqaabta u soo dadajiyo isagoo tii Aakhirana u dheertahay ma jiro dulmi iyo qaraaba goys). (Waxaa wariyay Imaam Axmad binu xambal).
Kuwaase xaqa ka riddooba waa kuwa shaydaan ka adkaaday, xaq diidayaalna ah, Eebana kama qarsoona xaalkoodu, waana kuwa si daran nafta looga qaadi, illeen waxay raaceen wax Eebe cadha galiya wanaagana way neceene. Muxammad (22-28).

29. Kuwii Qalbiga ka bukay ma waxay u maleeyeen inaan Eebe soo muujinayn xumaanta (iyo xasadka) Qalbiga kaga jira.

أَمْ حَسِبَ الَّذِينَ فِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ أَنْ لَنْ يُخْرِجَ
اللَّهُ أَضْعَافَهُمْ ﴿٦٩﴾

30. Haddaan doonno waan ku tusin karnaa kuwaas, waxaadna ku aqoonsan Calaamad, waxaad kaloo ku oqoonsan hadalka leexsan, Eebana waa ogyahay camalkooda.

وَلَوْ نَشَاءُ لَأَنزَلْنَاكَ لَهُمْ فَلَعَرَفْتَهُمْ بِسْمَتِهِمْ
وَلَعَرَفْتَهُمْ فِي لَحْنِ الْقَوْلِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ أَعْمَالَكُمْ ﴿٧٠﴾

31. waannu idin imtixaanaynaa intaan ka ogaanno (iyadoo bannaanka u soo baxday) kuwiinna Jahaadi iyo kuwa samra, waana imtixaanaynaa Xaalkiinna.

وَلَتَبْلُوَنَكُمْ حَتَّى تَعْلَمَ الْمُجْهَدِينَ مِنَكُمْ
وَالضَّالِّينَ وَتَبْلُوَنَ أَعْبَارَكُمْ ﴿٧١﴾

32. Kuwa gaalobay ee Jidka Eebe ka leexiya dadka Raasuulkana khilaafa (lana collooba) inta xaqu u caddaaday ka dib waxba Eebe kama dhimayaan camalkoodana wuu burrin.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَصَدُّوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ وَشَاقُوا
الرَّسُولَ مِنْ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ الْهُدَىٰ لَنْ يَضُرُّوا
اللَّهَ شَيْئًا وَسَيُحِطُّ بِأَعْمَالِهِمْ ﴿٧٢﴾

33. Kuwa xaqa rumeeyow Eebe adeeca,

يَتَّبِعُهَا الَّذِينَ آمَنُوا وَاطِيعُوا اللَّهَ وَاطِيعُوا

Rasuulkiisana adeeca, Camalkiinnana
hayska burrinina.

الرَّسُولَ وَلَا تَبْطُلُوا أَعْمَالَكُمْ ﴿٣٣﴾

34. Kuwa gaalobay oo Jidka Eebe ka
leexiyay dadka kadibna dhinta iyagoo
gaala ah Eebe uma Dambi dhaafo.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَصَدُّوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ ثُمَّ مَأْوَاهُمْ كَمَا قَالُوا فَلَنْ يَعْفِرَ اللَّهُ لَهُمْ ﴿٣٤﴾

Waxa Qalbiga ku jira Eebe waa ogyhay samaan iyo xumaanba, hadduu doonana wuu muujin karaa xaalka munaafiqiinta, waxaa ka mid ah calaamooyinkooda diin iyo muslim ceeb ka sheeg iyo Carrab leexsan, Adduunkuna waa Guri imtixaan say u kala muuqdaan Run-lowga, Jahaadaha, Samirlaha iyo kuwa xunxun, Ruuxiise gaalooaba oo xaqa dadka ka reeba Rasuulkana ka collooba isagoo xaqu u cad yahay, muxuu Eebe u dhimi isagaa la kulmi xumaantiisee, Cid xumaan fashay gaalnimana ku dhimatay (Eebaan ka magan galaynaaye) Eebe uma Dambi dhaafo umana naxariisto. Muxammad (29-34).

35. Ha tabar darraannina mu'miniin-
taay ood markaa heshiis u yeedhaan, i-
dinkaaba ka sarreeyee Eebana idinla
jiraaye, Camalkiinnana ma nusqaami-
naayee.

فَلَا يَهْتُمُّوا وَتَدْعُوا إِلَى السَّلَامِ وَأَنْتُمْ الْأَعْلَوْنَ وَاللَّهِ
مَعَكُمْ وَلَنْ يَبْزُقَكُمْ أَعْمَالَكُمْ ﴿٣٥﴾

36. Nolosha Adduunyo waa uun ciyaar
iyo dheeldheel, haddaadse xaqa rumay-
saan ood dhawrsataan wuxuu idin siin
(Eebe) abaalkiinna, xoolihiinnana idin
waydiisan maayo.

إِنَّمَا الْحَيَوةُ الدُّنْيَا لَعِبٌ وَلَهُمْ وَإِنْ تُؤْمِنُوا وَتَتَّقُوا
يُؤْتِكُمْ أَجْرَكُمْ وَلَا يَسْأَلْكُمْ أَمْوَالَكُمْ ﴿٣٦﴾

37. Hadduu idin waydiiyo (Eebe) xoo-
lihiinna (dhammaan) idinkuna celceliyo
waad bakhayloobaysaan, waxaana soo-
bixi colnimadiinna.

إِنْ يَسْأَلْكُمْ مَوَالِهِمْ فَبِحِفْظِكُمْ تَبَدَّلُوا وَخُفِجَ
أَضْعَفَتْكُمْ ﴿٣٧﴾

38. Kuwaas xaqa rumeeyow waxaa
laydiinku yeedhi inaad jidka Eebe wax
ku bixisaan, waxaase idinka mid ah
kuwo ku bakhayli, Ruuxiise bakhayla
wuxuu uun kala bakhaylay Naftiisa
Eebana waa hodon, idinkuna waxaad
tihin fuqaro, haddaad xaqa ka jeedsa-
taanse wuxuu Eebe idinku baddali
kuwa kale oon idin lamid noqonayn.

هَآتَيْتُمْ هَؤُلَاءَ نَدْوَانَ لِيُفِئُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَمِنْكُمْ
مَنْ يَبْخُلُ وَمَنْ يَبْخُلْ فَإِنَّمَا يَخْضَلُ عَنْ نَفْسِهِ وَاللَّهُ
الْعَنِي وَأَنْتُمْ الْفُقَرَاءُ وَإِنْ تَتَوَلَّوْا يَسْتَبَدِلْ قَوْمًا
عَيْرَكُمْ ثُمَّ لَا يَكُونُوا أَمْثَلَكُمْ ﴿٣٨﴾

Mu'miniintu waa inay xoog yeeshaan, tabaryarina ka digtoonaadaan, si ayan gaalada ugu hoos noolaannin, xaqoodana loo duudsiyin, maxaa yeelay iyagaaba Eebe la jiraa, hadday dhintaanna waa Janno, hadday noolaadaanna waa guul iyo sarrayn, Adduunkuna waa dhalanteed ee waa in Ruuxa caqliga leh uu ku maraa wanaag iyo Eebe ka cabsi, isagoo Waajibkiisana Gudanaya, waa in Jidka Eebana xoolaha lugu bixiyaa, bakhaylinimadana layska jiraa illeen Naftaada umbay dhibiye, Eebase waa hodon dadkaase u baahan had iyo jeere, Ciddiise iskibriisa oo xaqa ka jeedsata wuxuu Eebe awoodaa inuu ku baddalo mid ka khayr badan kana wanaagsan. Muxammad (35-38).

Suurat Al-Fatx

سُورَةُ الْفَتْحِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

1. Annagaa ku siinnay fatxi (gargaar) cad Nabiyoow.

2. Si Eebe kuugu dhaafo waxaad hormarsatay iyo wixii dib maray oo gaf ah, Nicmadiisana kuugu taam yeelo, Jidka toosanna kuugu hanuuniyo.

3. Kuuna gargaaro Eebe Gargaar wayn.

4. Eebe waa kan ku dajiyay xasilloonida Quluubta mu'miniinta si ay Iimaan ugu siyaadsadaan Iimaankoodii, Eebaana iska leh Samaawaadka iyo dhulka Junuudda ku sugan, Eebana waa wax walba oge falsan.

5. si uu u galiyo mu'miniinta rag iyo haweenba Jannooyin ay dureereyso dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku waari, Dambigoodana wuu asturi, arrintaasuna Eeba agtiisa waxay ku tahay Liibaan wayn.

Suuraddan wanaagsani waxay ku soo dagtay markay Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) iyo asaxaabtiisii ka soo laabteen heshiiskii Xudeybiya, oo gaaladii Qureysheed u diideen Nabiga iyo asaxaabtiisa inay cumraystaan, fareenna inay Madiina ku noqdaan, shuruudo adagna la dhigteen Inkastoooy xagga daahirka aadmooddo tabar-yari muslimiinta, haddana waxaa ka dambeeyay khayr badan iyo fatxi, waxayna caddayn in Eebe Naasir iyo gargaare u yahay mu'miniinta, Waxaa kale oy ku tusin in jidka toosan lagu sugnaado, Xoogna Eebaa iska leh, Cirka iyo Dhulkuna awooddiisay ku hoos jiraan, Liibaanta kama dambaysta ahse waa saamaxaad Eebe oo la helo iyo Jannadiisa siduu Mu'miniinta u ballanqaaday. Al-Fatx (1-5).

6. iyo inuu caddibo munaafiqiinta Rag iyo Haweenba, iyo mushrikiinta (gaalada) rag iyo haweenba, Eebana u ma-

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِنَّا فَتَحْنَا لَكَ فَتْحًا مُبِينًا ﴿١﴾

لِيَعْرِفَ أَنْ اللَّهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِكُمْ وَمَا أَخَّرَ وَيُتِمَّ نِعْمَتَهُ عَلَيْكُمْ وَيَهْدِيَكُمْ صِرَاطًا مُسْتَقِيمًا ﴿٢﴾

وَيَنْصُرُ لَكُمْ اللَّهُ نَصْرًا عَظِيمًا ﴿٣﴾

هُوَ الَّذِي أَنْزَلَ السَّكِينَةَ فِي قُلُوبِ الْمُؤْمِنِينَ لِيَرُدُّوا عَلَيْهِمْ جُنُودَ الْأَرْضِ وَيَمُنُّوا بِمَا عَٰمَرُوا بِحَمْدِ اللَّهِ رَبِّ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٤﴾

لِيَدْخُلَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا وَيُكَفِّرُ عَنْهُمْ سَيِّئَاتِهِمْ وَكَانَ ذَلِكَ عِنْدَ اللَّهِ قُرْآنًا عَظِيمًا ﴿٥﴾

وَيُعَذِّبُ الْمُتَّفِقِينَ وَالْمُنَافِقَاتِ وَالْمُشْرِكِينَ وَالْمُشْرِكَاتِ الظَّالِمِينَ بِاللَّهِ ظَنٍّ أَلَسَّوْا عَلَيْهِمْ

leeyey mala xun, xumaantu korkooda ha ku wareegto, Eebana Ha u cadhoo-do, hana lacnado, hana u darbo Naarta Jahannamo, meel loo ahaadana iyadaa u xun.

7. Eebaa iska leh Junuudda ku sugan Samaawaadka iyo Dhulka, Eebana waa adkaade falsan.

8. Annagaa ku dirray Nabiyow adigoo marag ah, Bishaareeye Digena ah.

9. Si aad dadow Eebe u rumaysaan iyo Rasuulkiisa uguna gargaartaan, una waynaysaan, Eebana ugu tasbiixsataan Aroor iyo Galabba.

10. Kuwa Nabiyow kula ballamaya waxay la ballamayaan uun Eebe, ballanna ka qaadeen, Ruuxiise burriya Naftiisa umbuu ku buriyay, Ruuxii oofiyaana wuxuu Eebe kula ballamay wuxuu siin Ajri wayn.

Eebe wuxuu ugu goodiyay Munaafiqiinta iyo Mushrikiintaba Caddibaad daran, maxaa yeelay way ka gaaloobeen waxayn u maleeyeen male xun, Ciddii saas yeeshana Eebe wuu dullayn wuuna u cadhoon oo lacnadi, wuxuuna ku abaalmarin Naarta Jahannamo (Eebe ha naga koriyee), Eebaana iska leh cirka iyo dhulka waxa ku sugan, Nabiga Muxammad ahna (Naxariis iyo nabadgalayo korkiisa Eebe ha yeelec) Eebaa soo diray si uu marag, bishaareeye, Dige iyo gaadhsiye ugu noqdo Caalamka, Dadkana waxaa ku waajib ah dhammaantood inay rumeeyaan, wayneeyaanna una gargaaraan, Eebana had iyo jeer, Habeen iyo dharaar ku xidhnaadaan kana dhawrsadaan. Al-Fatx (6-10).

11. Waxay kugu dhihi kuwii ka dib maray (Jahaadka) ee Ree-Baadiyaha (carbeed ahaa), waxaa na shuqliyay xoolahannagii, iyo ahalkannagii, ee Eebe noo dambi dhaaf waydii, Carrabkooda yay ka dhihi waxaan qalbigooda jirin, waxaad ku dhahdaa yaa Eebe wax idiinka hanankara hadduu dhib idinla doono, ama gargaar idinla doono Saas ma aha, ee Eebe waa ogyahay waxaad camal falaysaan.

12. Waxaadse u malayseen inayan

دَائِرَةُ السَّوْءِ وَعَضِبَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ وَعَنْهُمْ وَأَعَدَّ لَهُمْ جَهَنَّمَ وَسَاءَتْ مَصِيرًا ﴿٦﴾

وَاللَّهُ جُودُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَكَانَ اللَّهُ غَنِيًّا حَكِيمًا ﴿٧﴾

إِنَّا أَرْسَلْنَاكَ شَهِيدًا وَمُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿٨﴾

لِيُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَتُعَزِّرُوهُ وَتُوَقِّرُوهُ وَتُسَبِّحُوهُ بُكْرَةً وَأَصِيلًا ﴿٩﴾

إِنَّ الَّذِينَ يُبَايِعُونَكَ إِنَّمَا يُبَايِعُونَ اللَّهَ يَدُ اللَّهِ فَوْقَ أَيْدِيهِمْ فَمَنْ نَكَتَ فَاِنَّمَا يَنْتَكُ عَلَى نَفْسِهِ وَمَنْ أَوْفَى بِمَا عَاهَدَ عَلَيْهِ اللَّهُ فَمَسِيْرِيْهِ أَجْرًا عَظِيْمًا ﴿١٠﴾

سَمِعَ قَوْلَ لِكِ الْمُخَلَّفُونَ مِنَ الْأَعْرَابِ شَغَلَتْنَا أَمْوَالُنَا وَأَهْلُونَا فَاسْتَغْفِرْنَا يَقُولُونَ بِأَلْسِنَتِهِمْ مَا لَيْسَ فِي قُلُوبِهِمْ قُلْ مَنْ يَمْلِكُ لَكُمْ مِنَ اللَّهِ شَيْئًا إِنْ أَرَادَ بِكُمْ ضَرًّا أَوْ أَرَادَ بِكُمْ نِعْمًا بَلْ كَانَ اللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿١١﴾

بَلْ لَطَمْنَا خُرَاتٍ لَّنْ يَنْقَلِبُ الرَّسُولُ وَالْمُؤْمِنُونَ إِلَى

Rasuulka iyo Mu'miniinta u soo noqonaynin ehelkooda waligood, saasaana lagu qurxiyay qalbigiinna, waxaadna ahaateen kuwo halaagsamay.

أَهْلِيهِمْ أَبَدًا وَرُبُّنَا ذَٰلِكَ فِي قُلُوبِكُمْ وَظَنَّتُمْ ظَنَّ
السَّوْءِ وَكُنْتُمْ قَوْمًا بُورًا ﴿١٢﴾

13. Ruuxaan Eebe rumayn iyo Rasuulkiisa waxaan Gaalo u darabnay Naarta Saciiro.

وَمَنْ لَّمْ يُؤْمِنْ بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ فَإِنَّا أَعْتَدْنَا لِلْكَافِرِينَ
سَعِيرًا ﴿١٣﴾

14. Eebaa iska leh xukunka waxa Samaawaadka iyo Dhulka ku sugan, wuxuuna u dambi dhaafi cidduu doono, wuxuu caddibi cidduu doono, waana dambi dhaafe naxariiste ah.

وَاللَّهُ مَالِكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ يَغْفِرُ لِمَن يَشَاءُ
وَيُعَذِّبُ مَن يَشَاءُ ۗ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١٤﴾

Ma habboona in waqtiga Muslimiintu Dagaal iyo Jihaad ku jirto uu Ruuxna Cudur daar la'aan iska fadhiisto, isagoo ku marmarsoon in xoolihiisii iyo ehelkiisii shuqliyeen, siday faleen carabtii reer baadiyaha ahayd, oy haddana dambi dhaaf waydiistaan, arrintaasu waa carrab iyo qalbi is khilaafsan, Eebe umbaana dhib iyo dheefba hanta wax walbana og, mana aha in Rasuulka iyo mu'miniinta loo maleeyo xumaan iyo inay jabi ooyan guulaysanaynin iyagoo fayowna u soo noqonaynin ehelkoodii. Eebe iyo Rasuulkiisa cidaan rumaynin wuxuu Eebe u Darbay Naarta Saciira, Cirka iyo dhulka xukunkooda Eebaa iska leh, Ruuxuu doonana wuu u dambi dhaafaa, kuu doonana wuu caddibaa waana dambi dhaafe naxariiste ah. Al-Fatx (11-14).

15. Waxay idinku odhan kuwii dib maray markaad qaniimo aadaan si aad u soo qaadataan na daaya aan idin raacnee, iyagoo dooni inay baddalaan hadalka Eebe, waxaad dhahdaa na raaci maysaan Eebaana sidaa yidhi mar hore, waxayse dhihi waad na xasdaysaan, waase kuwo aan wax ka-saynin in yar mooyeen.

سَيَقُولُ الْمُخَلَّفُونَ إِذَا انطَلَقْتُمْ إِلَىٰ مَغَائِرِ
لِتَأْخُذُوهَا ذُرُوعًا وَنَسِيْعًا كَيْ يُرِيدُوا أَن يَدْرُؤُوا
كَلِمَ اللَّهِ فَلَئِن تَدَّعَيْنَا كَذَلِكُمْ قَالَ اللَّهُ مَن قَبَّلَ
فَسَيَقُولُونَ بَلْ نَحْسُدُؤُنَّ بَلْ كَانُوا لَا يَفْقَهُونَ
إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٥﴾

16. Waxaad ku dhahdaa Nabiyow kuwa dib maray ee Ree baadiyaha ah waxaa laydinku yeedhi kuwa xoog badan oo daran inaad la dagaallantaan intay ka islaamaan, haddaadse addeecdaan wuxuu Eebe idin siin ajri fiican, haddaadse jeedsataan saad horayba ugu jeedsateen wuu idin caddibi caddibaad daran.

قُلْ لِلْمُخَلَّفِينَ مِنَ الْأَعْرَابِ سُدُّعُونَ إِلَىٰ قَوْمِ أُوْلَىٰ
بِأَسْ سَيَدِيدِ فَقَتَلُوا نَهْمَهُ أَوْ يُسْمَوْنَ فَإِن طَلَبُوا جُنُودَكُمْ
اللَّهُ أَجْرًا حَسَنًا وَإِن تَوَلَّوْا كَمَا تَوَلَّيْتُمْ مَن قَبَّلَ
يُعَذِّبُكُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٦﴾

17. Ruux Indha la' korkiisa dhib ma saarra iyo ka naafada ah iyo kan buka, (hadday Jihaadka ka haraan) Ruuxiise

لَيْسَ عَلَى الْأَعْمَىٰ حَرْجٌ وَلَا عَلَى الْأَعْرَجِ حَرْجٌ
وَلَا عَلَى الْمَرِيضِ حَرْجٌ ۚ وَمَن يُطِيعِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ يَدْخُلْهُ

Eebe addeeca iyo Rasuulkiisa wuxuu galin Jannooyin ay dhexdureeri Wabiyaal, Ruuxiise jeedsada wuu caddibi caddibaad daran.

جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ وَمَنْ يَتَوَلَّ يَعدِبْهُ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٧﴾

Saas oo kale mahabboona in marka muslimiintu dagaal iyo duullaan ku jirto laga fadhiisto, marka xoolo iyo Qaniimo gaalada laga helana la doono in wax laga helo, saas waa inayan muslimiintu oggolaannin, Maxaa yeelay Eebe kama raalli aha, inkastooy dhihi waad na xasdaysaan, maxaa yeelay waa wax ma gartayaal, waase in la imtixaano kuwaas, lana faro inay la dagaallamaan kuwa daran oo xoog badan intay ka islaamaan, Hadday saas yeelaan wanaag buu Eebe siin, haddayse Jeedsadaan siday horayba ugu jeedsadeen wuu caddibi, Ruuxna Eebe kuma kallifo wuxuusan karin, Saas daraadeed Indhoole, Naafo, iyo Ruux buka midna dhib-dagaal ma saara. Al-Fatx (15-17).

18. Eebe wuu ka raalli noqday mu'miniinta markay kugula ballantamayeen Nabiyoow Geedka hoostiisa, Eebana waa ogaaday waxa Quluubtooda ku sugan, wuxuuna ku dajiyay xasillooni, wuxuuna ku abaal marin fatxi (nasri) dhaw.

* لَقَدْ رَضِيَ اللَّهُ عَنِ الْمُؤْمِنِينَ إِذْ يُبَايِعُونَكَ
تَحْتَ الشَّجَرَةِ فَعَلِمَ مَا فِي قُلُوبِهِمْ فَأَنْزَلَ
السَّكِينَةَ عَلَيْهِمْ وَأَثَبَهُمْ فَتْحًا وَبَرَاءَةً ﴿١٨﴾

19. Iyo Qaniimooyin badan oy qaadan-doonaan, Eebana waa adkaade falsan.

وَمَعَانِهِمْ كَيْدَهُمْ لِأَخْذُهَا وَإِنَّمَا اللَّهُ عَلِيمٌ
حَكِيمٌ ﴿١٩﴾

20. Eebana wuxuu idiin yaboohay Qaniimooyin badan ood Qaadanaysaan, Tanna wuu idiin hormariyay, (waa Qaniimadii khaybar), wuuna idinka reebay Gacmaha dadka (gaalada) si ay ugu noqoto mu'miniinta calaamo (Runta Nabiga) idiinkuna hanuuniyo jidka toosan.

وَعَدَّ اللَّهُ مُعَانِعِيكُمْ كَيْدًا كَبِيرًا تَأْخُذُونَهَا فَعَجَل
لَكُمْ هَذِهِ وَكَفَّ أَيْدِيَ النَّاسِ عَنْكُمْ وَلِتَكُونَ
آيَةً لِّلْمُؤْمِنِينَ وَيَهْدِيَكُمْ صِرَاطًا مُسْتَقِيمًا ﴿٢٠﴾

21. Waxaa kale oo uu idiin dadajiyay Qaniimo kale oydaan awooddeen, Eebana wax walba waa karaa.

وَأُخْرَى لَوْ تَقَدَّرُ وُأَعْيَاهَا فَدَاخِلَ اللَّهُ بِهَا وَكَانَ
اللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرًا ﴿٢١﴾

22. Hadday idinla diriraan kuwa gaaloobay way carari (oy jabi) sokeeye iyo gargaarna heli maayaan.

وَلَوْ قَاتَلَكُمُ الَّذِينَ كَفَرُوا أَلْوَلُوا أَلْأَكْبَرُ
لَمْ يَلْمِزُوكُمْ لِأَنَّهُمْ أَتَوْا بِالنَّبِيَّةِ وَلَا تَصِيرُوا ﴿٢٢﴾

23. Saasna waa waddadii Eebe ee u horreysay ummadihii tagay, wax badali karana ma jiro.

سُنَّةَ اللَّهِ الَّتِي قَدْ خَلَتْ مِنْ قَبْلُ وَلَنْ تَجِدَ لِسُنَّةِ
اللَّهِ تَبْدِيلًا ﴿٢٣﴾

Xaqa kuwa ku ballantama Eebe waa ka raalli noqdaa, sida Asaxaabtii Nabiga, (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yelee) markay kula ballantameen Xudaybiya oo Maka u dhaw, wanaag iyo xasilloonina ku abaal mariyay, Ruuxii mu'min ah oo laga helo saasna Eebe wuxuu ku abaal marin

gargaar iyo nasri iyo qaniimooyin, maxaa yeelay isagaa awood leh, Eebana waa u oofiay ballankii mu'miniinta oo waa kii magaalada Maka ee barakaysan u soo celiyay mu'miniintii, Waxaana Sunnada Eebe ka mid ah in dadka xaqa ku toosan ee mu'miniinta ah ay adkaadaan, waana xaqa aan la baddali karin, waase kuwee kuwaas Eebe u gargaari, waa kuwa dhab-ahaan Xaqa u rumeeay una raacay. Al-Fatx (18-23).

24. Eeb waa kan idin kala reebay «idinna kala ilaaliyay» gaaladii markaad maka gudeheeda joogteen intuu idin makaniyay korkooda kaddib, Eebana waa arkaa waxaad camal falaysaan.

وَهُوَ الَّذِي كَفَّ أَيْدِيَهُمْ عَنْكُمْ وَأَيْدِيَكُمْ عَنْهُمْ بِبَطْنِ مَكَّةَ مِنْ بَعْدِ أَنْ أَظْفَرَكُمْ عَلَيْهِمْ وَكَانَ اللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرًا ﴿١٨﴾

25. Gaaladii makaad waa kuwii masaa-jidka xurmaysan idinka reebay iyadooy hadyadii darbantahay, inaygaadho halkii lagu xalaalaynlahaa, haddaynan jirin Rag iyo Haween mu'miniin ah (oo la nool) idinna aydaan ogayn in aad baabi'neey saan ayna mashaqo idinka haleesho (Eebe waa idiin fasixi lahaa). Si uu u galiyo naxariistiisa cidduu doono (yuu saas u yeelay), Hadday mu'miniintu ka soocmi lahaayeen gaalada wuxuu Eebe caddibi lahaa gaalada caddibaad daran.

هُمُ الَّذِينَ كَفَرُوا وَصَدُّوكُمْ عَنِ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَالْهَيْدَىٰ مَعَكُمْ أَوْ أَنْ يُبَلِّغَ مِنْكُمْ أَهْلَ الْبُيُوتِ رِجَالًا مُّؤْمِنِينَ وَإِسَاءَةَ مُّؤْمِنَاتٍ لَّمْ يَعْلَمْنَهُنَّ أَنْ تَطْفُوهُنَّ فُتْصِبِكُمْ مِنْهُنَّ مَعْرَةٌ يُعْتَبِرُ عَنْهَا الَّذِينَ اللَّهُ فِي رَحْمَتِهِ مِنْ بَشَرَةٍ لَوْ تَذَرْتُمُوهُنَّ لَتَدَّبَّرُوا الْقَوْلَ أَمْ ضَلَلْتُمْ لَوْلَا أَنَّ لِلَّذِينَ كَفَرُوا مِنْهُمْ جَزَاءً أَلِيمًا ﴿١٩﴾

26. Xusuusta marka Eebe yeelay kuwii gaaloobay Quluubtooda islawayni iyo cadho, sidii isla waynidii iyo cadhadii jaahiliinta oo Eebe ku dajiyay xasilloonidiisii Rasuulkiisa korkiisa iyo mu'miniinta, waafajiyayna kalimada dhawrsashada (Ashahaadada iyo ballan ku sugnaanshaha), iyagaana ugu mudan kalimadaas ehelna u ah, Eebana wax walba waa ogyahay.

إِذْ جَعَلَ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي قُلُوبِهِمُ الْحَمِيَّةَ حَمِيَّةَ الْجَاهِلِيَّةِ فَأَنْزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَىٰ رَسُولِهِ وَعَلَىٰ الْمُؤْمِنِينَ وَأَلْزَمَهُمْ كَلِمَةَ التَّقْوَىٰ وَكَانُوا أَحَقَّ بِهَا وَأَهْلَهَا وَكَانَ اللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمًا ﴿٢٠﴾

Eebaa awood leh, markuu doonana wuu kala baajiyaa dagaalka mu'miniinta iyo gaalada, xigmo darteed, sidii uu ku falay Nabigii (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) iyo asaxaabtiisii iyo gaaladii ree makaad ee ahaa kuwii ka celiyay inay Maka galaan, si ay u cumraystaan, Eebe wuu dhawraa mu'miniinta, wuuna u naxariistaa, isla wayni iyo jaahilnimana wax ma tarto ee wanaag, Eebe ka yaabid, xasillooni iyo limaanbaa wax tara waana jidka mu'miniinta. Al-Fatx (24-26).

27. Eebe waa u rumeeay Rasuulka riyadiisii si dhab ah, ahaydna in mu'mi-

لَقَدْ صَدَّقَ اللَّهُ رَسُولَهُ الْرُّبِّيَّ بِالْحَقِّ لِنَدْحُلَّ

niintu gali Masjidka xurmaysan hadduu Eebe doono, iyagoo aamin ah oo Timaha xiiri ama gaabin (Xajka iyo Cumrada ka dib) iyagoon cidna ka cabsanaynin, wuxuuna Eebe ogyahay waxaydaan ogayn, markaasuu yeelay galitaanka Maka ka soke Fatxi (Xudaybiya).

28. Eebe waa kan la diray Rasuulkiisa hanuun iyo diin xaq ah, si uu uga sare mariyo Diimaha oo dhan, Eebaana marag ku filan.

29. Muxammad waa Rasuulkii Eebe, kuwa la jirana waa ku daranyihiin gaalada, dhexdoodana way isu naxariistaan, waxaad arkaysaa iyagoo ruukuusan oo sujuudsan oo dalbi Deeqda Eebe iyo raalli ahaanshihiisa, Calaamadooduna wajigooday ka muuqataa, Sujuudda raadkeeda darteed, saasaana lagu tilmaamay Tawreed, Tilmaantooda injiilna waxay lamid yihiin Beer soo bixisay fiidda oo xoogaysatay oo si fiican u istaagtay layaabna galisay beertaha, si uu Eebe ugu Cadho galiyo gaalada, Eebe wuxuu u yaboohay kuwa xaqa rumeeyay camal wanaagsanna falay oo mu'miniinta ka mid ah dambi dhaaf iyo ajri wayn.

Riyada Nabiyadu waa xaq, Markuu Rasuulkuna arkay isaga iyo asaxaabta oo dawaafi Kacbada haddana laga soo celiyay inuu maka galo yaa dad waydiiyeen xaalkaas, markaasaa Eebe caddeeyay inay xaq noqon, wayna rumoowday Ru'yadii, Nabigii iyo asaxaabtiina waa galeen iyagoo aamin ah, wayna dawaafeen sidii Eebe ugu yaboohay, Tan kale waa in mu'miniintu isu naxariistaan dhexdooda, waase inay ku darraadaan iskana celiyaan gaalada, sida Eebe tilmaamay, Nabiguna wuxuu yidhi: Mu'miniinta is jacaylkoodu iyo naxariistoodu waxay la mid tahay jidh kaliya oo hadduu qaar jirrado qaarka kale la anuunsan lana soo jeedi.

Rasuulka muxammad ah iyo asaxaabtiisa Kutubihii hore waa lagu tilmaamay wanaagooda iyo isjacaylkooda iyo geesinnimadoodaba iyagoo lagu shabbahay Beer soo kacaysa, ee waa in raadkoodii la raaca wanaagoodiina lagu daydaa. Al-Fatx (27-29).

الْمَسْجِدَ الْحَرَامَ إِن شَاءَ اللَّهُ ءَامِينَ مُحَلِّفِينَ
رُءُوسِكُمْ وَمَقْصِرِينَ لِأَخْتَاوَاتِكُمْ فَعَلِمَا
لَمْ تَعْلَمُوا فَوَجَعَلْنَا مِنْ دُونِ ذَلِكَ فَتْحًا
قَرِيبًا ﴿٧﴾

هُوَ الَّذِي أَرْسَلَ رَسُولَهُ بِالْهُدَى وَدِينِ الْحَقِّ
يُظَاهِرُهُ عَلَى الدِّينِ كُلِّهِ وَكَفَى بِاللَّهِ
شَهِيدًا ﴿٨﴾

مُحَمَّدَ رَسُولَ اللَّهِ وَالَّذِينَ مَعَهُ أَشِدَّاءَ عَلَى الْكُفَّارِ
رُحَمَاءَ بَيْنَهُمْ تَرَاهُمْ رُكَّعًا سُجَّدًا يَبْتَغُونَ فَضْلًا مِنَ
اللَّهِ وَرِضْوَانًا سِيمَاهُمْ فِي وُجُوهِهِمْ مِنْ أَثَرِ السُّجُودِ ذَلِكَ
مِثْلَهُمْ فِي التَّوْرَةِ وَمِثْلَهُمْ فِي الْإِنْجِيلِ كَرَّمَ الْخَرَجَ
سَطْرَهُ فَفَارَزَهُ فَاَسْتَعْلَظَ فَاَسْتَوَى عَلَى سُوْقَيْهِ
يُعِجِبُ الزَّرَّاعَ لِيَغْظِبَهُمُ الْكُفَّارُ وَعَدَّ اللَّهُ الَّذِينَ
ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ مِنْهُمْ مَغْفِرَةً وَأَجْرًا
عَظِيمًا ﴿٩﴾

Suurat Al-Xujuraat

سُورَةُ الْحُجُرَاتِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

1. Kuwa xaqarumeeyow ha ku dagdagina Eebe iyo Rasuulkiisa hortiiisa (waxayan fasixin), Eebana ka dhawrsada illeen wax walba wuu maqli wuuna ogyahaye.

2. Kuwa xaqa rumeeyow ha ka koryeelina codkiinna codka Nabiga, hana kula jahrina (qaylyina) hadal sida qaarkiin qaar ugula jahro (qaylyo) si aan camalkiinnu u burin idinkoon ogayn.

3. kuwa codkooda hoos u dhiga Rasuulka agtiisa kuwaasi waa kuwo Eebe imtixaanay quluubtooda dhawrsasho darteed, waxayna mudanyihiin dambi dhaaf iyo ajri wayn.

4. kuwa kaaga dhawaaqi qolalka ga-daashooda badankoodu wax ma kaysaan.

5. Hadday samraan intaad uga soo bixi yaa u khayr badnaan lahayd, Eebana waa dambi dhaafe naxariista.

Ruuxa mu'minka xaqa ah waa inuu Eebe u hoggaansamo iyo rasuulkiisa, waxaan Eebe iyo Rasuulkiisu bannayna (xalaalaynin) lagu deg degin waana in si adab iyo xushmad ah loo qaddariyaa Nabiga, si fiicanna looga asluubsadaa Eebe Quraankiisa iyo Nabiga Qoowlkiisa. Aayadahanna dhamaan waxay mu'miniinta ku hanuunin waynaynta Eebe iyo tixgalinta Nabiga iyo addeciddooda, si loogu liibaano Adduunka. Al-Xujuraat (1-5).

6. Kuwa xaqa rumeeyow hadduu idiinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la'aan, markaasna aad shallaydaan waxaad fasheen.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

يٰۤاَيُّهَا الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا لَا تَقْدِمُوْا بَيْنَ يَدَيِ اللّٰهِ وَرَسُوْلِهِۦ
وَآتَوْا اللّٰهَ اِنَّ اللّٰهَ سَمِيْعٌ عَلِيْمٌ ﴿١﴾

يٰۤاَيُّهَا الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا لَا تَرْفَعُوْا اَصْوَاتَكُمْ فَوْقَ صَوْتِ
التّٰنِيْ وَلَا يَجْهَرُوْا بِالْقَوْلِ كَجَهْرِ بَعْضِكُمْ لِبَعْضٍ اَنْ
تَحْطَبَ اَعْمَالُكُمْ وَاَنْتُمْ لَا تَشْعُرُوْنَ ﴿٢﴾

اِنَّ الَّذِيْنَ يَعْضُوْنَ اَصْوَاتَهُمْ عِنْدَ رَسُوْلِ اللّٰهِ
اُوْلٰئِكَ الَّذِيْنَ اَمْتَحَنَ اللّٰهُ فُلُوْبَهُمْ لِيَتَقَوَّى لَهُمْ
مَغْفِرَةٌ وَّاَجْرٌ عَظِيْمٌ ﴿٣﴾

اِنَّ الَّذِيْنَ يَتَادُوْنَكَ مِنْ وَّرَآءِ الْكُفْرٰتِ اَكْثَرُهُمْ
لَا يَعْقِلُوْنَ ﴿٤﴾

وَتَوٰاْنَهُمْ صَبْرًا وَّاَحْسَبُ خَرَجَ الْيَهُودَ لَكَ اَنْ خِيْرًا لَّهُمْ
وَاللّٰهُ غَفُوْرٌ رَّحِيْمٌ ﴿٥﴾

يٰۤاَيُّهَا الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا اِنْ جَاءَكُمْ فَاسِقٌ بِنَبِيٍّ فَتَبَيَّنُوْا اَنْ
تُصِيبُوْا قَوْمًا يَجْهَلُوْنَ فَتُضَيِّحُوْا عَلٰٓى مَا فَعَلْتُمْ
كَلِمٰتٍ ﴿٦﴾

7. Ogaadana in Rasuulkii Eebe idin dhexjoogo, hadduu idinku addeeco waxyaala badanna aad dhibboonaysaan, wuxuuse Eebe idinla jeclaaday Iimaan, kuna qurxiyay quluubtiinna, wuxuuna idinla nacay gaalnimo, faasiq-nimo iyo caasinnimo, kuwaasina waa kuwa hanuunsan.

وَأَعْلَمُوا أَنَّ فِيكَ رَسُولَ اللَّهِ لَوْ يُطِيعُكَ فِي كَثِيرٍ
مِّنَ الْأَمْرِ لَعَسَتْ لَكُمُ الْإِيمَانُ
وَرِزْقُهُ فِي قُلُوبِكُمْ وَكَرَّهَتْ إِلَيْكُمُ الْكُفْرَ وَالشُّرُوقَ
وَالْعُصْيَانَ أُولَئِكَ هُمُ الرَّاكِبُونَ ﴿٧﴾

8. Waa fadliga (siinta) Eebe iyo naxariistiisa, Eebana wax walba waa ogyahay, waana falsame.

فَضْلًا مِّنَ اللَّهِ وَرِعْمَةً وَاللَّهُ عَلَيْهِ حَكِيمٌ ﴿٨﴾

9. Hadday Laba qolo oo mu'miniinta ah dagaallamaan heshiisiya dhexdooda, hadday midu ku xadgudubto tan kale la dirira tan xadgubtay intay amarka Eebe uga noqoto (xaqa aqoonsato), Hadday u noqotana si caddaalad ah u wanaajiya dhexdooda una garsoora, Eebe wuxuu jecelyahay kuwa garsooree.

وَلَا تَأْبَهُنَّ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ فَاصْلِحُوا
بَيْنَهُمَا فَإِن بَعَثَ إِحْدَاهُمَا عَلَى الْآخَرَى فقتلوا أَلَّتِي
تَبِغِي حَتَّى تَفِي إِلَى أَمْرِ اللَّهِ فَإِن فَاتَتْ فَأَصْلِحُوا
بَيْنَهُمَا بِالْعَدْلِ وَأَقْسِطُوا إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ ﴿٩﴾

10. Mu'miniintu waa uun walaalo, ee wanaajiya walaalihiin dhexdooda, Eebana ka dhawrsada, waxaad u dhawdhihiin inuu idiin naxariistee.

إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَأَصْلِحُوا بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ
وَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١٠﴾

Ruuxa mu'minka ah waa inuusan maqlinkutidhi kuteen iyo sheeko, si uusan Dad kale meel ugaga dhicin, markaasna nidaamo iyo shallayto ugu dambayn, waase in wax la hubsadaa, Kitaabka Eebe iyo Sunnada Nabigana la raaco, lana toosnaado oo xumaanta iyo gaalnimada laga fogaado, si mu'min dhab ah loo noqdo, dadka mu'miniinta ahna waa walaalo, waana inay is jecladaan isna gargaaraan, siduu Nabigu (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yelee) yidhi: «Muslimku waa walaalka muslimka, yuuna dulmiyin, yuunana dhiibin», cidda gardaranna la qabto wanaagna mu'miniinta dhexdooda la yeelo illeen waa walaalee. Al-Xujuraat (6-10).

11. Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin Ragna Rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badanyahaye, Haweenna yayna haween yasin waxay u dhawyihiin inay ka khayr badanyihiine, hana ceebeynina Naftiinna, hana isugu dhawaaqina naanays xun, waxaa xun magaca faasiqnimada iimaan kadib, Ciddaan tawbad keeninna waa daali-miin.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا يَسْعَ قَوْمٌ مِّن قَوْمِ عَسَىٰ أَنْ
يَكُونُوا آخِرًا أَوَّلَهُمْ وَلَا يَأْتِيهِمْ مِّن نِّسَاءٍ عَسَىٰ أَنْ يَكُنَّ
حَبِيرًا مِّنْهُمْ وَلَا تَلْمِزُوا أَنفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَرُوا بِلِقَابِ
يَتَسَّ الْأَنسَامِ الشُّرُوقِ بَعْدَ الْإِيمَانِ وَمَنْ لَّمْ
يَتُوبْ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿١١﴾

12. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaa yeelay malaha qaarkiis waa dambi, hana is jaasusina, qaarkiinna qaar yuusan xamannin, miyuu jecelyahay midkiinna inuu cuno Hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad necebtihiin arrintaa, Eebana ka dhawrsada waa tooba aq-bale naxariistee.

13. Dadow waxaan idinka abuuray lab iyo dhaddig, waxaana idkinka yeellay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, Ruuxase ugu sharaf badan Eebe agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Eebana wax walba waa ogyahay.

Aayadahani waa Aayado la yaab leh, oo mu'miniinta ku toosin kuna hanuunin waddada wanaagsan, uguna digi jidka xun sida xaqiraadda, yasidda, Naanays xun isugu yeedhidda, is cebeeynta, tuhunka, malaha badan, iyo isjaasusidda, dhammaan waxyaalahaasuna waa wax ku xun diinta Islaamka, Ruuxa mu'minka xaqa ahna waa inuu ka fogaadaa dhibka walaalihiisa Muslimka iyo Xumayntiisa siduu Nabigu yidhi (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) «Ruuxa muslimka ah waa ka xaaraan muslimka, Xoolihiisa, Sharaftiisa iyo dhiiggiisaba, waxaana shar ugu filan Ruux inuu xaqiro walaalkiisa Muslimka ah». waxaa wariyay Abuu Daawuud iyo Tirmidi. Al-Xujuraat (11-13).

14. Waxay dheheen ree baadiyihii carbeed waan rumaynay (xaqa), waxaad ku dhahdaa maydaan rumaynin, laakiin dhaha waan hoggaansannay, Iimaan-kuna wali Quluubtiinna ma galin, haddadse adeecdaan Eebe iyo Rasuulkiisa kama nusqaamiyo camalkiinna waxba, Eebana waa dambi dhaafe naxariista.

15. Kuwa mu'miniinta ah waa kuwa uun rumeeyay Eebe iyo Rasuulkiisa oon shakiyin, kuna Jahaada Xoolahooda iyo naftooda jidka Eebe dartiis, kuwaasi waa kuwa runlowga ah.

16. Waxaad dhahdaa ma Eebbaad u sheegeysaan diintiinna isagoo og waxa Samaawaadka iyo Dhulkaba ku sugan, Eebana wax walba waa ogyahay.

يَأَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اجْتَنِبُوا كَيْدَ اِمِّنِ الظَّنِّ
 اِنَّ بَعْضَ الظَّنِّ اِثْمٌ وَّ لَا تَجَسَّسُوا وَّ لَا يَغْتَبِ بَعْضُكُمْ
 بَعْضًا اِيْحٰى اَحَدُكُمْ اَنْ يَّاْكُلَ لَحْمَ اَخِيهِ مَيْتًا
 فَكَرِهْتُمُوْهُ وَاْتَقُوا اللّٰهَ اِنَّ اللّٰهَ تَوَّابٌ رَّحِيْمٌ ﴿١٢﴾

يَأَيُّهَا النَّاسُ اِنَّا خَلَقْنَاكُمْ مِنْ ذَكَرٍ وَّ اُنْثٰى وَّ جَعَلْنَاكُمْ شُعُوْبًا
 وَّ قَبٰىلَ لِتَعَارَفُوْا اِنَّ اَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللّٰهِ اَتْقٰىكُمْ
 اِنَّ اللّٰهَ عَلِيْمٌ حَيِيْرٌ ﴿١٣﴾

* قَالَتِ الْاَعْرَابُ ءَا مَنَّا قُلْ لَمْ نَكُنْ مَعَكُمْ وَاَلَكُنْ قَوْلًا
 اَسَافًا وَّلَمَّا يَدْحُلِ الْاِيْمٰنُ فِي قُلُوْبِكُمْ وَاِنْ تُطِيعُوْا
 اللّٰهَ وَّرَسُوْلَهُ، لَا يَلِيْكُمْ مِنْ اَعْمٰلِكُمْ شَيْءٌ اِنَّ اللّٰهَ
 عَفُوْرٌ رَّحِيْمٌ ﴿١٤﴾

اِنَّمَا الْمُؤْمِنُوْنَ الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا بِاللّٰهِ وَّرَسُوْلِهِ
 ثُمَّ لَمْ يَرْتَابُوْا وَّ جَاهَدُوْا بِاَمْوَالِهِمْ وَاَنْفُسِهِمْ فِي
 سَبِيْلِ اللّٰهِ اُوْلٰئِكَ هُمُ الصّٰدِقُوْنَ ﴿١٥﴾

قُلْ اَتَعْبٰوْنَ اللّٰهَ بِدِيْنِكُمْ وَاَللّٰهُ يَعْلَمُ مَا فِي
 السَّمٰوٰتِ وَّمَا فِي الْاَرْضِ وَاَللّٰهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيْمٌ ﴿١٦﴾


17. Waxay kugu mannaysan inay Islaameen, waxaad dhahdaa haygu mannaysannina Islaamkiinna, Eebaa manna idinku leh inuu idinku hanuuniyay Iimaanka haddaad run sheegeysaan.

يَمُنُونَ عَلَيْكَ أَنْ أَسْلَمُوا قُلْ لَا تَمُنُوا عَلَيَّ إِلَّا سَلِمْتُمْ
بِئْسَ اللَّهُ يَمُنُّ عَلَيْكُمْ أَنْ هَدَيْتُكُمْ لِلْإِيمَانِ إِنْ
كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿١٧﴾

18. Eebe waa ogyahay waxa Samaawaadka ku maqan iyo dhulkaba, Eebana waa arkaa waxaad camal falaysaan.

إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ غَيْبَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاللَّهُ
بَصِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٨﴾

Xaq rumaynta iyo Eebe aqoontu ma aha wax Ruux walba iska sheegan, ee waxay u baahantahay camal fal iyo Iimaan dhab ah, waana inaan la noqonin kuwo daahirka ka muslin ah hoostana aan Iimaanku qalbigooda galin, sida kuwa Aayaddu sheegeyso. Mu'minka runta ah waa ka Xaqa si dhab ah u rumeeyay shakina galin, Xoolihiisa iyo Naftiisana Jidka Eebe ugu Jihaada, cid walbana Eebe waa ogyahay wuxuu yahay umana baahna in looga warramo, illeen isagaa wax walba oge, Islaamnimadana cidna ha ku mannaysan adaaba Eebe kuu sama falaye markuu kugu hanuuniyay Jidka toosan, isagaana manno kugu leh. Siduu Nabigu yidhi (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Ansaareey miyaanan idin helin idinkoo baadi ah oo Eebe igu kiin hanuuniyay iyo idinkoo kala tagsan oo Eebe igu kiin kulmiyay, ood caydh ahaydeen oo Eebe igu kiin hodmiyay, markuu hadal dhahaba waxay dhahayeen Eebe iyo Rasuulkiisa yaa manno leh. Al-Xujuraat (14-18).



Suurat Qaaf

سُورَةُ قَافٍ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Quraanka sharafta leh (in dadka la soo bixin).

ق وَالْقُرْآنِ الْمَجِيدِ ١

2. Waxayse La yaabeen inuu u yimid dige ka mid ah oy markaas dheheen gaaladii kan waa wax la yaab leh.

بَلْ عَجِبُوا أَنْ جَاءَهُمْ مُنذِرٌ مِنْهُمْ فَقَالَ الْكٰفِرُونَ هَذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ٢

3. Ma markaan dhimanno oon carro noqonno yaa nala soo celin, taas waa soo celin fog.

أَوَلَمْ نَسْأَلْكَ آتِئَاتِ ذٰلِكَ رَجْعِ بَعْدِ ٣

4. Waan ognahay waxa dhulku ka cunay jidhkooda, agtannada waxaa yaalla Kitaab koobay wax walba, oo ilaashan.

فَلَمْ عَلِمْنَا مَا تَنْقُصُ الْأَرْضُ مِنْهُمْ وَعِنْدَنَا كِتٰبٌ حَفِيظٌ ٤

5. Waxaybase beeniyeen xaqii markuu u yimid, waxayna ku suganyihiin xaal qasan.

بَلْ كَذَّبُوا بِالْحَقِّ لَمَّا جَاءَهُمْ فَهُمْ فِي أَمْرٍ مَّرِيحٍ ٥

6. Miyayna eegin Samada korkooda ah sidaan u dhisanay una qurxinnay ayna duleella u lahayn.

أَفَلَمْ يَنْظُرُوا إِلَى السَّمَاءِ فَوْقَهُمْ كَيْفَ بَنَيْنَاهَا وَرَافَعْنَاهَا وَمَا لَهَا مِنْ فُرُوجٍ ٦

7. Dhulkana waan waasicinnay waxaana ku sugnay Buuro, waxaana ka soo bixinnay dhexdiisa nooc kasta oo quruxsan.

وَالْأَرْضِ مَدَدْنَاهَا وَأَلْقَيْنَاهَا رَوِيًّا وَأَنْبَتْنَاهَا مِنْ كُلِّ رَوْحٍ يٰٓهِيَ ٧

8. Inay aragti iyo waano u noqoto Ruux kasta oo Addoon Eebe oo toobad keen badane ah.

تَبٰصِرَةٌ وَذَكَرَىٰ لِكُلِّ عَبْدٍ مُّبِينٍ ٨

Suuraddani waa suuraad la yaab leh oo kulmisay abuuridda Khalqiga, soo bixinta, Xisaabta, Jannada, Naarta, wanaag marinta, ciqaaabta, rajo galinta iyo cabsi galintaba. Eebana wuxuu quraanka ugu dhaartay in waxa Suuraddu sheegeyso xaqyahay, Eebana wax kama cajiso, soo bixinta dadka iyo kulmintay xubnohodiina awood buu u leeyahay, maxaa yeelay wax walba waa ogyahay, waana kan inoogu nimceeyay Cirka korkeenna ah ee Quruxda badan iyo Dhulka uu inoo waasiciyay ee aan ku dul

noollahay wax kasta oo wanaagsanna inooga soo bixiyay, si ay waano, Eebe aqoonsi iyo toobad keen innoogu noqoto, waana arrin Eebe lugu mahadiyaa. Qaaf (1-8).

9. Waxaan ka soo dajinnay samada Biyo barakaysan oon ku soo bixinnay Beero iyo Midho la goosto.

وَزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مَاءً مُبْدًا كَمَا قَدْ بَدَأْنَا بِهِ جَنَّتٍ
وَحَبَّ الْحَصِيدِ ﴿٩﴾

10. Iyo timir dheer oo fidsan oo leh fiido wax ka soo dhashaan oo is dul saaran.

وَالنَّخْلُ بَاسِقَاتٍ لَهَا طَعْنَ بَصِيدٌ ﴿١٠﴾

11. Si Addoommada Eebe loogu irsaayo, Biyahaana waxaan ku noolaynay Magaalo dhimatay, saasayna soo bixintu tahay.

رَزَقْنَا لِلْعِبَادِ وَأَحْيَيْنَاهُ بَدَأَهُ مِثْلًا كَذَلِكَ الْخُرُوجُ ﴿١١﴾

12. Kuwa Reer Makaad hortooda waxaa xaqii beeniyay Qoomkii (Nabi) Nuux iyo Rasi dadkeedii iyo thamuud.

كَذَّبَتْ قَبَائِلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ وَأَصْحَابُ الرَّسِّ وَثَمُودُ ﴿١٢﴾

13. Iyo Ree Caad iyo Fircoon iyo (Nabi) Luud walaalihiis (qoomkiisii).

وَعَادٌ وَفِرْعَوْنُ وَإِخْرَانُ لُوطٍ ﴿١٣﴾

14. Iyo kayntii dadkeedii (Nabi) Shucayb qoomkiisii) iyo Qoomkii Tubbac, dhammaantood waxay beeniyeen Rasuulladdi, waxaana ku dhacay wixii Eebe ugu goodiyay (ciqaabtii).

وَأَصْحَابُ الْأَيْكَةِ وَقَوْمِ تُبَّعٍ كُلٌّ كَذَّبَ الرُّسُلَ فَحَقَّ
وَعِيدُ ﴿١٤﴾

15. Ma waxaan ka noognay abuuriddii hore, waxayse shakisan yihiin abuuridda cusub (soo bixinta).

أَفَعَدِينَا بِالْخَلْقِ الْأَوَّلِ بَلْ هُمْ فِي لَبْسٍ مِنْ
خَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٥﴾

Ilaaheen Nicmadiisu waa badantahay, waxaana ka mid ah Roobka uu ku soo bixiyo Cunnada kala duwan, si khalqiga Eebe ugu noolaadaan, una nooleeyo Magaalo abaarowday oo dhimatay, si ay dalil ugu noqoto dadka soobixinta Qiyaame, maxaa yeelay kama darra abuuriddii hore siduu Eebe ku yidhi hadalkiisa Qudsiga ah, «waxay dhihi banii-aadamku iima soo celinayo Eebe siduu igu billabay, Abuurka horana igama fududa soo celinta». Xaqdiidayaashu ma aha wax cusub iyo wax ku gaar ah kuwii Nabiga beeniyay, ee waxaa Nabiyadoodii iyo Rasuulladoodii beeniyay gaalo badan oo hore, waxaase ku dhacday halaag, waxaana dhulkii u hadhay xaqii Eebe ee Nabiyadu u yeedhayeen. Qaaf (9-15).

16. Dhab ahaan yaan u abuuray Insaanka (dadka) waana ognahay waxay naftiisu ku waswaasin Annagaana uga dhaw xididka dhuunta.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ وَنَعَلَمَّا تَوَسَّوَسُ بِهِ نَفْسَهُ، وَنَحْنُ
أَقْرَبُ إِلَيْهِ مِنْ حَبْلِ الْوَرِيدِ ﴿١٦﴾

17. Markay la kulmi malaa'igta ilaali-

إِذْ تَلَقَى الْمُنَافِقِينَ عَنِ الْيَمِينِ وَعَنِ الشِّمَالِ قَعِيدٌ ﴿١٧﴾

naysa oo Midigta iyo bidixda ka fadhida (hadalka gofka iyo falkiisa).

18. Wax kastoo uu ku hadlo waxaa la jooga Raqiib iyo Catiid (oo qori).

مَا يَلْفُظْنَ مِنْ قَوْلٍ إِلَّا لَدَيْهِ رَقِيبٌ عِينٌ ﴿١٨﴾

19. Waxaa u yimid sakaraadkii geerida si dhab ah wanataas geeridaad ka cararaysay.

وَجَاءَتْ سَكْرَةُ الْمَوْتِ بِالْحَقِّ ذَلِكَ مَا كُنْتَ مِنْهُ تَحِيدُ ﴿١٩﴾

20. Suurkii (Qiyaamana) waa la afuufi waana Maalin laysu yaboohay (oo sugan).

وَيُفْحِ فِي الصُّورِ ذَلِكَ يَوْمَ الْوَعِيدِ ﴿٢٠﴾

21. Naf walba way iman iyadoo malag hoggaamin midna ku marag furi.

وَجَاءَتْ كُلُّ نَفْسٍ مَعَهَا سَائِقٌ وَشَهِيدٌ ﴿٢١﴾

22. Waxaana loo odhan waad halmaan-sanaydeen arrintan (Qiyaamada) waxaana kaa faydnay daboolkii araggaaguna Maanta waa xoog badan yahay.

لَقَدْ كُنْتَ فِي غَفْلَةٍ مِّنْ هَذَا فَكُفِّنَّا عَنَّكَ عِظَاءَكَ
فَبَصُرُوكَ الْيَوْمَ حَرِيدٌ ﴿٢٢﴾

23. Malaggii la xidhiidhayna wuxuu dhihi waa kan waana darbanyahay, (kii lay xilsaaray).

وَقَالَ قَرِينُهُ هَذَا مَا لَدَىٰ عِينِمْ ﴿٢٣﴾

24. Markaasaa lugu dhihi ku tuura Naarta Jahnnamo Gaalnimo badane madax adag dhammaantiis.

الْقِيَامِ فِي جَهَنَّمَ كُلِّ كَارٍ عَيْنِمْ ﴿٢٤﴾

25. Oo khayrka reebid badan gardarraa-loowna ah shakilowna ah.

مَتَاعِ الْخَيْرِ مُعْتَدٍ مُّرِيدٍ ﴿٢٥﴾

26. Ee Eebe miciisa Ilaah kale yeelay, ku tuura caddibaad daran.

الَّذِي جَعَلَ مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ فَأَلْفِيَاهُ فِي
الْعَذَابِ الشَّدِيدِ ﴿٢٦﴾

Dadka Eebaa abuuray, Malaa'igna wuu u diray wax kastoo la camal-falana way qoraysaa Eebana waa ogyahay, Dadkana waxaa ka dambeeya sakaraadka Geerida, Suurka Qiyaamaha iyo xisaab, saa darteed waa in loo darbadaa siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee): Sidee u raaxaysan isagoo malaggii suurka Afka uu saaray Wajigana uu leexiyay uuna sugi in la idmo, markaasay dheheen Rasuulki Eebow seen dhahnaa, markaasuu yidhi dhaha: Eebaa kaafiyahannaga ah Wakiilna isagaa u wanaagsan. Qaaf (16-26).

27. Saaxiibkiisii (shaydaankiisii) wuxuu dhihi Eeboow anigu ma dhuminnin laakiin isagaa baadi fog ku sugnaa.

﴿قَالَ قَرِينُهُ رَبَّنَا مَا أَطْعَمْتُهُ، وَلَكِنْ كَانَ فِي ضَلَالٍ بَعِيدٍ﴾ ﴿٢٧﴾

28. Eebe wuxuu dhihi ha ku murmina agtayda waan idiin hormariyay gooddigi.

﴿قَالَ لَا تَحْتَسِبْ مَوَآءِدِي، وَقَدْ قَدَّمْتُ إِلَيْكُمْ بِالْوَعِيدِ﴾ ﴿٢٨﴾

29. Hadalna agtayda laguma baddalo, mana dulmiyo addoomada.

مَا يَدُلُّ الْقَوْلَ لَدَىٰ وَمَا أَنَا بِظَلَمٍ لِلْعَبِيدِ ﴿٢٩﴾

30. Xusuusta Maalinta aan u dhahayno Naarta Jahannama Ma buuxsantay, oo markaa ay dhihi wax ma la ii siyaadin.

يَوْمَ نَقُولُ لِجَهَنَّمَ هَلِ امْتَلَأَتْ وَنَقُولُ هَلْ مِنْ مَزِيدٍ ﴿٣٠﴾

31. Jannadiina loo soo dhaweeyo kuwii dhawrsaday iyadoon ka fogayn.

وَأَرْزَقْتِ الْجِنَّةَ الْمُتَشَفِّينَ عَمَّ بَعِيدٍ ﴿٣١﴾

32. Waxaasina waa wixii loo yaboohay Ruux kasta oo tawbadkeen badan oo dhawrid badan (ballanka).

هَذَا مَا نُوْعِدُونَ لِكُلِّ أَوَّابٍ حَفِيظٍ ﴿٣٢﴾

33. Ruuxii Eebaha Raxmaan ah ka yaaba isagoon arkaynin, oo la yimaada Qalbi toobadkeen badan.

مَنْ حَفِظَى الرَّحْمَنَ بِالْغَيْبِ وَجَاءَ بِقَلْبٍ مُنِيبٍ ﴿٣٣﴾

34. Waxaa lugu dhihi ku gala Jannada Nabdgalyo waana Maalintii waaridee.

أَدْخُلُوهَا بِسَلْمٍ ذَلِكَ يَوْمُ الْخُلُودِ ﴿٣٤﴾

35. Jannada waxay ka heli waxay doonaan, agtannadana waxaa ah siyaado.

لَهُمْ مَا يَشَاءُونَ فِيهَا وَلَدَيْنَا مَزِيدٌ ﴿٣٥﴾

36. Immisa Qarniyaan halaagnay Reer Makaad ka hor oo kana xoogbadan iyagoo dhulka ku gagaddoomay, meel Eebe looga cararana ma jirto.

وَكَرَاهُوا لَكَ آتَابَهُمْ مِنْ قَرْنٍ هُمْ أَشَدُّ مِنْهُمْ بَطْشًا فَنَقَّبُوا فِي الْبِلَادِ هَلْ مِنْ مَّجِيسٍ ﴿٣٦﴾

37. Waxaasina waa waanda ruuxii qalbi leh ama wax dhagaysan isagoo Qalbi-giisu joogo.

إِنَّ فِي ذَلِكَ لَذِكْرًا لِمَنْ كَانَ لَهُ قَلْبٌ أَوْ أَلْقَى السَّمْعَ وَهُوَ شَهِيدٌ ﴿٣٧﴾

Saaxiibka xun wuu ku luggooyin, wuuna ku dhumin, marka dhib kugu dhacana wuu kaa tagi kaana carari sida shaydaanka, Eebana wax walba waa ogyahay muranna agtiisa ma yaallo, maxaa yeelay horuuba wax walba u caddeeyay cidnana ma dulmiyo, Naarta Jahannamana (Eebe ha naga koriyee) waxay codsan in loo kordhiyo ehelkeeda, Jannana waxaa loo soo dhaweyn kuwii Eebhood dhabnimo uga yaabay, xumaantana ka dhawrsaday, Ruuxii Eebe oqoon ah, toobadna keena waxaa lagu abaal marin Janno wax walba uu ka heli. ee waa in lagu waana qaato ummadihii hore iyo waxay ku dambeyeen, xumaantana laga fogaado illeen Eebe wax ka fakan kara ma jiree. Qaaf (27-37).

38. Dhab ahaan annagaa Samaawaadka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya ku abuuray lix maalmood, wax daal ahna nama taabannin.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ وَمَا مَسْتَأْذِنُ مِنْ عُوبٍ ﴿٣٨﴾

39. Ku samir (Nabiyow) waxay shee-

فَأَصْبِرْ عَلَىٰ مَا يَقُولُونَ وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ قَبْلَ

gayaan, Eebana u tasbiixso adigoo ku mahadin qorrax soo bax ka hor iyo dhicidda ka hor.

طُلُوعِ الشَّمْسِ وَقَبْلِ الْغُرُوبِ ﴿٢٥﴾

40. Habeenkana qaar u tasbiixso iyo sujuudda dabadeed.

وَمِنَ اللَّيْلِ فَسَبِّحْهُ وَأَدْبَرَ السُّجُودِ ﴿٤٠﴾

41. Dhagayso Maalinta uu ka dhawaaqi mid dhawaaqa meel dhaw.

وَأَسْمِعْ يَوْمَ يُنَادِ الْمُنَادِ مِنْ مَّكَانٍ قَرِيبٍ ﴿٤١﴾

42. Waa ay maqli qaylada oo dhab ah, waana Maalinta soo bixidda.

يَوْمَ يَسْمَعُونَ الصَّيْحَةَ بِالْحَقِّ ذَلِكَ يَوْمُ الْخُرُوجِ ﴿٤٢﴾

43. Annagaa waxna noolaynna waxna dilla, xaggannagaana loo soo ahaan.

إِنَّا نَحْنُ نُحْيِيهِمْ وَنُمِيتُهُمْ وَإِلَيْنَا الْمَصِيرُ ﴿٤٣﴾

44. Maalinta Dhulku ka dillaaci iyagoo dagdagi, taasina waa soo kulmin noo fudud.

يَوْمَ نَشْفِقُ الْأَرْضِ عَنْهُمْ يَسِرًا وَغَدَاً ذَلِكَ حَشْرٌ
عَلَيْنَا يَسِيرٌ ﴿٤٤﴾

45. Annagaa og waxay dhihi, aduguna matihid mid xoogi korkooda, ee ku waani Quraanka Ruuxii Eebe waciid-kiisa (gooddigiisa) ka yaabi.

نَحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَقُولُونَ وَمَا أَنْتَ عَلَيْهِمْ بِجَبَّارٍ فَذَكَرْ
بِالْقُرْآنِ مَنْ يَخَافُ وَعِيدِ ﴿٤٥﴾

Cirka iyo dhulka iyo waxa khalqi ah ee ku dhexnoolba Eebaa abuuray, wax daaliyana ma jiro, waxaase loo baahanyahay ku xidhnida Eebe adkaysi iyo cibaadadiisa oo la badiyo habeen iyo dharaarba. maxaa yeelay waxaa imaan maalin dadka la kulmin oo qayla daran ka kor dhawaaqi, Qubuurahana ay si dagdag ah uga soo bixi, Nabiguna wuxuu yidhi (maxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelec): Anaa ugu horrayn Ruux dhulku ka dillaaco). Waxaa wariyay Muslim. Eebaana wax nooleeya waxna dila, dadkuna isagay u ahaan, wax walbana waa u fududiyahay, waase in dakda la waaniyo si quruxsanna wax loogu sheego, illeen xoog wax kuma hanuunee, hallawna wax ma taree. Qaaf (38-45).



Suurat Ad-Daariyaat



Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay dabaysha (Carrada kicisa).

وَالذَّرِيَّتِ دَرُورًا ①

2. Iyo daruurta xambaarta culayska (Roobka).

فَالْحَوْلِكِ وَقِرًا ②

3. Iyo doonnida sida fudud u socota.

فَالْحَرِيَّتِ يُسْرًا ③

4. Iyo Malaa'igta amarka qaybisa.

فَالْمَقْسَمَاتِ أَمْرًا ④

5. Ee dadow waxa laydiinku goodin waa run.

إِنَّمَا تُوْعَدُونَ لَصَادِقٌ ⑤

6. Abaalmarintuna waa sugan tahay.

وَلَا الَّذِينَ لَا يُعِ ⑥

7. Samada yuu Eebe ku dhaartay ee quruxda iyo waddooyinka leh.

وَالسَّمَاءِ ذَاتِ الْكُرْسِيِّ ⑦

8. Ee dadow waxaad ku sugan tihiin hadal is khilaafsan.

إِن كُنتُمْ لِي قَوْلٍ مُّخْتَلِفٍ ⑧

9. Iimaankana waxaa laga iilaa ruux dhumay.

يُؤْفِكُ عَنْهُ مَنْ آفَكَ ⑨

10. Waxaana la nacladay Beenaalayaasha.

فُقِيلَ الْكَرِصُونَ ⑩

11. Ee ah kuwa xumaantooda (baadin-nimadooda) ku dhex hilmaansan.

الَّذِينَ هُمْ فِي عَمْرُوهُمْ سَاهُونَ ⑪

12. Waxay waydiin goorta abaalmarinta (qiyaamada).

يَسْأَلُونَ أَيَّانَ يَوْمِ الدِّينِ ⑫

13. Waana maalinta naarta lagu gubi.

يَوْمَ هُمْ عَلَى النَّارِ يُفْتَنُونَ ⑬

14. Laguna dhihi dhadhamiya caddibaaddii aad dadajisanayseen.

ذُوقُوا فَتَنَتِكُمْ هَذَا الَّذِي كُنتُمْ بِهِ تَسْتَعْجِلُونَ ⑭

Sida Aayado badan sheegeen Eebe wuxuu ku dhaartaa wax badan oo khalqiigisa ka mid ah. xaqna wuu u leeyahay, waxayna ku tusin adkaynta waxa la sheegi, sida Qiyaamada, xisaabta iyo abaal-marinta. Jidka toosanna waxaa ka leexda kuwa xaqa isu diida ee beenaalayaasha ah, xumaantana dhexdabaasha,

Qiyaamda iyo soo bixintana si xun u waydiya, waxaase lagu abaal-marin naar daran, saas daraadeed waxaa waajib ah in Jidka toosan la qaado ee Jannada aadaya, jidka xunna laga leexdo ee Jahannama u baxa. Ad-Daariyaat (1-14).

15. Kuwa dhawrsaday waxay ku sugnaan Jannooyin iyo Ilo.

إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ ﴿١٥﴾

16. Iyagoo qaadan waxa Eebe siiyay, maxaa yeelay waxay ahaayeen horay kuwo wanaag fala.

ءَأَجِزِينَ مَاءَ آتَاهُمْ مِنْهُمْ كَأَوْ أَقْبَلِ ذَلِكَ مِنْ مَحْسِنِينَ ﴿١٦﴾

17. Waxayna ahaayeen kuwo wax yar Habeenkii seexda.

كَأَوْ أَقْلِيلًا مِنَ الْبَيْتِ مَا يَهْجَعُونَ ﴿١٧﴾

18. Waagana way dambi dhaaf waydii-sanayeen.

وَبِالْأَسْحَارِ هُمْ يَسْتَعْفِرُونَ ﴿١٨﴾

19. Xoolohoodana xaq bay ku leeyihiin kuwa waydiista iyo ka dhibaataysan.

وَفِي أَمْوَالِهِمْ حَقٌّ لِّلسَّائِلِ وَالْمَحْرُومِ ﴿١٩﴾

20. Dhulkana waxaa ugu sugan calaamooyin kuwa wax yaqiin.

وَفِي الْأَرْضِ آيَاتٌ لِّلْمُوقِنِينَ ﴿٢٠﴾

21. Naftiinna miyaydaan arkaynin (waana qaadasho).

وَفِي أَنْفُسِكُمْ أَفَلَا تُبْصِرُونَ ﴿٢١﴾

22. Samada yuuna jiraa risqigiinnu iyo waxa laydiin yaboohi.

وَفِي السَّمَاءِ رِزْقُكُمْ وَمَا تُوعَدُونَ ﴿٢٢﴾

23. Allaha Cirka iyo dhulka yaan ku dhaarannaye waxa quraanku sheegi waa sugan yahay sida hadalkiinna oo kale.

فَوَرَبِّ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ إِنَّهُ لَحَقٌّ مِّثْلَ مَا أَنَّكُمْ تَنْطِفُونَ ﴿٢٣﴾

Sama fale Eebe wuxuu ka abaal-mariyaa wanaag iyo Janno, waxaana ka mid ah kuwa habeenkii Cibaadaysta dadkoo hurda' siduu Nabigu yidhi (Ammaan iyo nabadgalyo Eebe Korkiisa hayecele) «Dadow wax quudiya, Qaraabadana xidhiidhiya, Salaantana faafiya, habeekiina tukada dadkoo hurda Jannada aad ku gasheen nabadgalyee».

Iyo kuwa aroorta Eebe dambi dhaaf warsada, xoolohoodana xaq ka bixiya, kuna waana qaata dhulka iyo naftoodaba, sida oo kale Cirka siduu Eebe u habeeyay. saa daraadeed waa in Eebe laga yaabo wuxuu ballanqaadayna la rumeeyo illeen waa dhab sida hadalkoodde. Ad-Daariyaat (15-23).

24. Ma ku soo gaadhay warkii martidii (Nabi) Ibraahiim ee sharafta lahayd.

هَلْ أَتَاكَ حَدِيثُ صَيْفِ بْنِ أَبِي هَبَةَ الْمُكَرَّمِ ﴿٢٤﴾

25. Markay salaameenna, isna uu salaantii ka celiyey kuna yidhi waxaad tihiin kuwo aan la oqoonnin.

إِذْ دَخَلُوا عَلَيْهِ فَقَالُوا سَلَامًا قَالَ سَلَامٌ قَوْمٍ مُنْكَرُونَ ﴿٢٥﴾

26. Markaasuu aaday eheelkiisii lana yimid Dibi shilis (una gawracay).

فَرَّغَ إِلَىٰ أَهْلِهِ فَأَنجَىٰ إِلَيْهِمُ الَّذِينَ آمَنُوا وَأَوَّحَىٰ إِلَىٰ الْفِرْعَوْنَ أَنِ اصْنَعْ لِي بُرْجًا فَاصْنَعْ لَهَا وَأَنجَىٰ إِلَيْهِمُ الَّذِينَ آمَنُوا ﴿٢٦﴾

27. Una soo dhaweeyay isagoo ku leh maxaad u cuni waydeen.

فَقَرَّبَهُ إِلَيْهِمْ قَالَ أَلَا تَأْكُلُونَ ﴿٢٧﴾

28. Wuxuuna naftiisa ka kasay cabsi xaggooda ah, waxayna ku dheheen ha cabsanin, waxayna ugu bishaareeyeen wiil cilmi yeelan.

فَأَوْحَسَ مِنْهُمْ خِيفَةً قَالُوا لَاحِقَةٌ مِنِّي وَبَشَّرُوهُ بِغُلَامٍ عَلِيمٍ ﴿٢٨﴾

29. Markaasay soo qaabishay haweenaydiisii iyadoo ku qaylyi wajigana garaaci Ma Habar mandhalays ah (yaa wax dhali).

فَأَقْبَلَتِ امْرَأَتُهُ فِي صَرَوفٍ فَصَكَتَ وَجْهَهَا وَقَالَ عَجَبٌ عُفِيمٌ ﴿٢٩﴾

30. waxayna ku dheheen xaalku waa saas, Eebahaaga falkasan ee waxwalba og yaa yidhi.

قَالُوا كَيْفَ نَدْرِكُكَ قَالَ رَبُّكَ بِإِذْنِهِ هُوَ الْوَالِي عَالِمٌ ﴿٣٠﴾

31. (Nabi Ibraahim) wuxuu ku yidhi xaalkiinnu see yahay kuwayohow la soo diray.

قَالَ فَاصْطَبِرْ كَذَّبْتُمْ أَيُّ الْفِرْسَالُونَ ﴿٣١﴾

32. Waxayna dheheen waxaa lanoo soo diray qoon dambilayaal ah.

قَالُوا إِنَّا أَنزَلْنَاهُ إِلَىٰ قَوْمٍ مُّجْرِمِينَ ﴿٣٢﴾

33. Si aan ugu soo dirro korkooda dhagaxyo dhoobo (kulul).

لِنُرْسِلَ عَلَيْهِمْ حِجَابًا مِّنَ طِينٍ ﴿٣٣﴾

34. Oo Eebe agtiisa loogu calaameeyay kuwa xadgudbay.

مُسَوَّمَةً عِنْدَ رَبِّكَ لِنُفِّسَنِ فِيهَا ﴿٣٤﴾

35. Markaasaan ka bixinnay kuwii mu'miniinta ahaa oo ku dhexjiray.

فَأَخْرَجْنَا مَن كَانَ فِيهَا مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٣٥﴾

36. kamana aannaan helin waxaan halguri oo muslin ah ahayn.

فَمَا وَجَدْنَا فِيهَا غَيْرَ بَنَاتٍ مِنَ الْمُسْلِمِينَ ﴿٣٦﴾

37. Waxaana kaga tagnay dhexdeeda calaamad (ay ku waana qaataan) kuwa ka cabsan caddibaad daran.

وَتَرَكْنَا فِيهَا آيَةً لِلَّذِينَ يَخَافُونَ الْعَذَابَ الْأَلِيمَ ﴿٣٧﴾

Qisada Nabi Ibraahim iyo martidiisa waxay kaloo ku soo aroortay suuradda huud iyo Alxijr, martisoorka iyo is xurmayntuna waa dabecad wanaagsan oo diinta islaamku farayso sida qisadana ka muuqata. waxaa kale oo Aayaduhu caddeeyeen in Eebe awooddiisu baaxad-wayntahay, oo cid duq ah iyo midaan dhali jirinba carruur ka beero, taasina waa naxariista Eebe iyo deeqdiisa. Tan kale waa in Eebe la oqoonsado luguna waana qaato tusaalooyinkiisa si uu inooga nabadgaliyo caddibaad daran. Ad-Daariyaat (24-37).

38. (Nabi) Muusana calaamo lagu waana qaatuu ahaa markaana u dirray Fircoon isagoo wata xujo cad. ﴿٢٨﴾ وَفِي مُوسَى إِذْ أَرْسَلْنَاهُ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ بِسُلْطٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٢٨﴾
39. Wuuna jeedsaday isagoo la jira colkiisii, wuxuuna ku yidhi waa Saaxir ama waa waalanyahay. ﴿٢٩﴾ فَوَلَّىٰ بَرَكِيهٖ وَقَالَ سِحْرٌ اَوْ اٰمَنُوتُمْ ﴿٢٩﴾
40. Markaasaan qabannay (ciqaabnay) isaga iyo Askartiisiiba, waxaana ku tuurray Badda isagoo la dagaalay. ﴿٣٠﴾ فَآخَذْنَاهُ وَجُودَهٗ فَنَبَذْنَاهُ فِى الْيَمِّ وَهُوَ مُلِيمٌ ﴿٣٠﴾
41. Ree Caadna (calaamo lagu waana qaato yaa ku sugan) markaana ku dirray dabayl wax halaagta. ﴿٣١﴾ وَفِى عَادٍ اِذْ اَرْسَلْنَا عَلَيْهِمُ الرِّيحَ الْعَقِيمَةَ ﴿٣١﴾
42. Wax kasta oy martana ka dhigi wax tirtiran. ﴿٣٢﴾ مَا تَدْرِيْنَ شَيْءٍ اَنْتَ عَلَيْهِ الْاِجْعَالُ كَالرَّيْبِ ﴿٣٢﴾
43. Ree Thamuudna (Calaamo lagu waana qaato yaa ku sugan) markii lagu yidhi raaxaysta ilaa waqti. ﴿٣٣﴾ وَفِى ثَمُوْدٍ اِذْ قِيلَ لَهُمْ تَمَتَّعُوا حَتَّىٰ حِينٍ ﴿٣٣﴾
44. Waxayna iska kibriyeen amarkii Eebe, waxaana qabtay Qaylo daran iyagoo cegi. ﴿٣٤﴾ فَعْتَرَا عَنْ اَمْرِ رَبِّهٖمْ فَاخَذَتْهُمْ الصُّعِقَةُ وَهُمْ يَنْظُرُوْنَ ﴿٣٤﴾
45. Mana ayna karin kicid, isumana ayna gargaarin. ﴿٣٥﴾ فَمَا اسْتَطَعُوا مِنْ قِيَامٍ وَمَا كَانُوْا مُنْتَصِرِيْنَ ﴿٣٥﴾
46. (Nabi) Nuux qoomkiisiina waa halaagnay, waxayna ahaayeen kuwo faasiqiin ah. ﴿٣٦﴾ وَقَوْمٌ نُّوحٌ مِنْ قَبْلِ اِنَّهٗمْ كَانُوْا قَوْمًا قٰسِيْنَ ﴿٣٦﴾

Aayadahani waxay ka qisoon ummadihii hore ee beeniyay Nabiyadoodii iyo Rasuulladoodii iyo sida Eebe u halligay markay xaqa diideen, waana wax lagu waana qaato lagana fogaado camalkoodii oo kale, Waxay kaloo Aayaduhu caddayn in la ciqaabi dulmiile oo dhan, sida loo ciqaabay Fircoon iyo wixii la mid ahaa.

Waxaase taas u sii dheer caddibaaddii Aakhiro ee wayneyd. Ad-Daariyaat (38-46).

47. Samada annagaa ku dhisnay xoog, waana waasicinnay. ﴿٣٧﴾ وَالسَّمَاءَ بَنَيْنَاهَا بِاَيْدِيْهِمْ وَاَنَا لَمُوسِعُوْنَ ﴿٣٧﴾
48. Dhulkana waan gogollay cid wax gogoshana annagaa u fiican (Eebe). ﴿٣٨﴾ وَالْاَرْضَ فَرَسْنَاهَا فَنَعْمَ الْمُهْدُوْنَ ﴿٣٨﴾
49. Wax walbana waxaan ka abuuray laba nooc, si aad ugu waana qaadataan. ﴿٣٩﴾ وَمِنْ كُلِّ شَيْءٍ خَلَقْنَا زَوْجَيْنِ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُوْنَ ﴿٣٩﴾

50. Ee Eebe u carara (toobad keena), waxaana idiin ahay dige cade (muuq-da).

فَقَرُّوا إِلَى اللَّهِ إِنِّي لَكَرِمَةٌ لِّذِي يُبِينُ ﴿٥٠﴾

51. Hana yeelina Eebe miciisa ilaah kale, waxaan idiin ahay dige cade.

وَلَا تَجْعَلُوا مَعَ اللَّهِ إِلَهًا آخَرَ إِنِّي لَكَرِمَةٌ لِّذِي يُبِينُ ﴿٥١﴾

52. Xaalku waa saas, Gaaladii ReeMaa-kaad ka horreysayna markastoo Rasuul u yimaado waxay dhihi jireen waa Saaxir ama waa waalan yahay.

كَذَلِكَ مَا أَتَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ مِنْ رَسُولٍ إِلَّا قَالُوا سَاحِرٌ أَوْ مُجْتَوٍ ﴿٥٢﴾

53. Miyay isu dardaarmeen arrintaas, waase qoom xadgudbay.

أَتَوَصَّوهُمْ بِبَلِّ مُمْرِقَاتٍ أَوْ ﴿٥٣﴾

54. Ee Nabiow iskaga jeedso xaggooda, ma tihid mid la dagaaliye (Eebe agtiisa).

فَقَوْلٍ عَنْهُمْ فَمَا أَنْتَ بِمَلُومٍ ﴿٥٤﴾

55. Ee wax waani, waanaduna waxay anfici mu'minintee.

وَذَكَرْنَا لِلذَّكَرَى تَسْفَعُ الْمُؤْمِنِينَ ﴿٥٥﴾

Cirka iyo Dhulkuba waxay ku ahaadeen amarka Eebe, isagaana abuurkooda hagaajiyay, wax-walbana Eebe wuxuu ka abuuray lammaane (lab iyo dhaddig) sida uu u abuuray laba kala gaddisan, Bad Barri, macaan khadhaadh Habeen Dharaar Lab iyo Dhaddig iyo wixii la mid ah, wuxuuna u abuuray inuu ku intifaaco Dadku, kuna waana qaato darteed, oo ay Eebe xaggiisa u jeedsadaan, taasoo ah daacadiisa, iyo in isagoo kaliya la caabudo lagana fogaado falkii iyo hadalkii xumaa; ee kuwii hore ee xumaa. Ad-Daariyaat (47-55).

56. Jinni iyo Insi waxaan Cibaadadayda ahayn uma abuurin.

وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالْإِنْسَ إِلَّا لِعِبَادُونَ ﴿٥٦﴾

57. Kamana doonaayo Risqi, iyo inay i quudiyaan.

مَا أَرِيدُ بِكُمْ مَرِيضِينَ وَرَافِدًا أَنْ يَطْعَمُونَ ﴿٥٧﴾

58. Illeen Eebe umbaa ah arsuqe xoog-badane.

إِنَّ اللَّهَ هُوَ الرَّزَّاقُ ذُو الْقُوَّةِ الْعَمِيمِ ﴿٥٨﴾

59. Kuwii dulmiilowga ahaa waxaa u sugnaaday qayb (ciqaab ah) oo la mid ah tii saaxiibbadoonii (ka horreyey) ee ha dadajisanin.


فَإِنَّ الَّذِينَ ظَلَمُوا ذُنُوبًا مِثْلَ ذُنُوبِ أَصْحَابِهِمْ فَلَا يَسْتَعِينُونَ ﴿٥٩﴾

60. Halaag wuxuu u sugnaaday kuwii gaalobay maalintoodii (Qiyaame) ee loogu yaboohay.

قَوْلٍ لِلَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ يَوْمِهِمُ الَّذِي يُوعَدُونَ ﴿٦٠﴾

Aayadahan waxay caddayn in Eebe u abuuray addoommadiisa inay caabudaan kaliya, ee uusan uga baahnayn wanaag iyo quud midna, «Cibaadaduna» waa sida ashahaadada, salaadda, Sakada, Soonka, Xajka, Jahaadka, Ammaanada, Runta, Deeqsinnimada iyo ku dhaqanka siday diintu farayso liibaanna lagu gaadho. Aakharo iyo Adduunba. Eebana wuxuu ku yidhi hadalkiisii quduska ahaa: (Ibnu Aadamow cibaadadayda u kali noqo laabtaada aan ka buuxiyo hodontinnimee, faqrigana aan kaa awdee. Haddaadan sidaa falin laabtaada waxaan ka buuxin shuqul, Faqrigana kaa awdimaayo) Waxaa wariyay Imaamu Axmad iyo Tirmidi iyo Ibnu Maajah.

Waana in la ogaado in dulmiilowgu uu mari waddadii kuwii ka horreeyay ee Daalimiinta ahaa, Halaag iyo Balaayana waxay u sugnaan maalinta Qiyaame Gaalo. Aq-Daariyaat (56-60).



Suurat Ad-Duur

سُورَةُ الطُّورِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Eebe wuxuu ku dhaartay) Duurisiina.
2. Iyo Kitaabka la dhigay.
3. Oo ku qoran warqado la fidiyay.
4. Iyo Gurigii cammirraa (Beytulmacmuur).
5. Iyo saanqaafka la koryeelay (cirka).
6. Iyo Baddii la kululeeyay.
7. Ee caddibaadda Eebe waa wax dhici (sugan).
8. wax celinna ma jiro.
9. Waxay dhici caddibaaddaas Maalinta Samadu wareegi.
10. Buuruhuna socon.
11. Halaagna waxaa iska leh maalintaas kuwa xaqa beeniyay.
12. Ee ah kuwa tiimbashada xumaanta ku dhex ciyaari.
13. Maalinta Naarta xoog loogu tuurina (waxaa lagu dhihi).
14. Waatan Naartii aad beenin jirteen.
15. Ma sixirbaa, mase waxbaydaan arkayn.
16. Gala, ama samra ama ha samrinee, waa isugu kiin mid, waxaa uun laydinka abaalmarin waxaad camal falayseen.

وَاطُّورٍ ①

وَكِتَابٍ مَّسْطُورٍ ②

فِي رَقٍّ مَنْشُورٍ ③

وَالْبَيْتِ الْمَعْمُورِ ④

وَالسَّقْفِ الْمَرْفُوعِ ⑤

وَالْبَحْرِ الْمَسْجُورِ ⑥

إِنَّ عَذَابَ رَبِّكَ لَوَاقِعٌ ⑦

مَا لَّهُ مِنْ دَافِعٍ ⑧

يَوْمَ تَعْمُرُ السَّمَاءَ مَورًا ⑨

وَتَسِيرُ الْجِبَالُ سَيْرًا ⑩

قَوْلًا يَوْمَئِذٍ لِلْمُكَذِّبِينَ ⑪

الَّذِينَ هُمْ فِي حَوْضٍ يَلْعَبُونَ ⑫

يَوْمَ يُدْعَوْنَ إِلَى نَارٍ جَهَنَّمَ دَعَاً ⑬

هَذِهِ النَّارُ الَّتِي كُنتُمْ بِهَا تَكْفُرُونَ ⑭

أَفَصِحْرًا هَذَا أَمْ أَنْتُمْ لَا تَبْصُرُونَ ⑮

أَصْلَوْهَا فَأَصْبُرُوا أَوْ لَا تَصْبُرُوا سِوَاهُ عَلَيْكُمْ إِنَّمَا

تَجْرُونَ مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ⑯

Eebe wuxuu ku dhaaran makhluuqaadkiisa ku tusin qudradiisa, sida Buurta Duuri-Siina; Kitaabka la dhawray, Quraanka, Beytul-macmuur, Cirka, dhulka, badda iyo wixii la mid ah, intaas oo dhanna waxaa lagu xoojin in ciqaabta Eebe oo xummanlowga u darbay sugantahay, wax reebina uusan jirin, Maalinta qiyaamana xaq diidayaasha lagu abaal marin ciqaab daran, maxaa yeelay waxay ku madax adkaadeen oo dabbaasheen Wabigii xumaanta, Eabana ma dulmiyine iyagaas is dulmiyay. Ad-Duur (1-16).

17. Kuwa Eebe ka dhawrsaday waxay gali Jannooyin iyo Nicmo.

إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ ﴿١٧﴾

18. Iyaga oo ku raaxaysan waxa Eebe siiyay, Eebohoodna wuxuu ka dhawray caddibaadda Jaxiimo.

فَلِكِهِمْ مِمَّا أَمْسَأْتُهُمْ رُزُقُهُمْ ۖ وَقَالَتْ لَهُمْ نَسَبَاتُ الْجَحِيمِ ﴿١٨﴾

19. (Waxaana lagu dhihi) cuna oo cabba idinkoo shifaysan camalkiinnii dartiis.

كُلُوا وَاشْرَبُوا هَنِيئًا بِمَا كَسَبْتُمْ تَقْمَلُونَ ﴿١٩﴾

20. Idinkoo ku dangiiga Sariiro la safay, waxaanna (Eebe) u guurin Haween Janno (Xuuralcayn).

مُنَكِّبِينَ عَلَى سُرُرٍ مَّصْفُوفَةٍ ۖ وَزَوَّجْنَاهُم بِحُورٍ عِينٍ ﴿٢٠﴾

21. Kuwa xaqa rumeeyay ee caruurtooduna liimaanka ku raacday waxaannu haleeshiin carruurtooda (Darajada iyo naxariista), camalkoodana waxba kama nusqaaminayno, Ruux walbana wuxuu kasbaday yuu u rahmanaan «u xidhnaani».

وَالَّذِينَ آمَنُوا وَاتَّبَعَتْهُمْ ذُرِّيَّتُهُمْ بِإِيمَانٍ أَلْحَقْنَا بِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ ۖ وَمَا أَلَتْنَاهُمْ مِنْ عَمَلِهِمْ مِنْ شَيْءٍ ۚ كُلُّ امْرِئٍ بِمَا كَسَبَ رَهِينٌ ﴿٢١﴾

22. Waxaannu u badinnay faakiho iyo Hilib oo ah waxay jecelyihiin.

وَأَمَدَدْنَاهُمْ بِفَلَاحِهِمْ وَحُحْرٍ ۖ وَمَا يَسْتَهْوُونَ ﴿٢٢﴾

23. Waxayna isku siin Jannada dhexdeeda (iyagoo sheekeysan) Weel (Macaan) kabuuxo, oon hadal xun iyo dambi midna lahayn.

يَنْتَرِعُونَ فِيهَا كَأَنَّهُمْ لَا لُغْوِيَهَا وَلَا تَانِيَةً ﴿٢٣﴾

24. Waxaana u adeegi wiilal aad mooddo Jawhar la dhawray.

ۖ وَيَطُوفُ عَلَيْهِمْ زِلْفَانٌ لَهُمْ كَأَنَّهُمْ لَوْلَاهُمْ مَكُونٌ ﴿٢٤﴾

Kuwa Eebba caabuda xumaantana ka dhawrsada wuxuu Eebbe ku abaal-marin Janno iyo wanaag, iyaga iyo carruurtoodii xaqa rumeeyayba, siduu ka wariyay Dabaraani Ilna-Cabbaas (wuxuu yidhi waxaan u malayn nabigu «Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebbe ha yelee» inuu yidhi (Marka Ruuxu Jannada galo yuu warsadaa labadiisii waalid iyo haweenaydiisii iyo carruurtiisii markaasaa la dhihi ma ayan gaadhin darajadaada, markaasuu dhihi: Eebbow waxaan u camalfalay naftayda iyo tooda, markaasaa la fari in la haleeshiiyo).

Camal cid fashayna lagama nusqaamiyo, waxay ehlu jannuhu doonaanna waxay ka heli dhexdeeda, muran, hadal xun iyo dambina ma yaallo Jannada dhexdeeda, Ee waa uun wanaag nicmo iyo raaxo. Ad-Duur (17-24).

25. Qaarkood (ehlu-Jannaha) yaa qaarka kale qaabila iyagoo wax is waydiin.

وَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ يَتَسَاءَلُونَ ﴿٢٥﴾

26. Waxayna isu dheheen waxaan ahayn horey Adduunkii kuwo ehelkoodii dhexdiisa ku cabsada.

فَأَلْمَأَأْنَا فِي أَهْلِهَا مُمْسِكِينَ ﴿٢٦﴾

27. Eebaase nagu mannaystay (dambi dhaaf), wuxuuna naga dhawray caddibaadda Samuumka (Jahannama).

فَمَنْ أَلَّهَ عَلَيْنَا وَوَقَدْنَا عَذَابَ السَّمُورِ ﴿٢٧﴾

28. Waxaan ahayn horay kuwo barya Eebe, Ilaahayna waa Baarri naxariista.

إِنَّا كُنَّا مِنْ قَبْلُ نَدْعُوهُ إِنَّهُ هُوَ الْبَرُّ الرَّحِيمُ ﴿٢٨﴾

29. Ee waani (Nabiyow dadka), nicmada darteed ma tihid wax sheege iyo waalane midnee.

فَذَكِّرْ فَمَا أَنْتَ بِنِعْمَتِ رَبِّكَ بِكَاهِنٍ وَلَا مَجْنُونٍ ﴿٢٩﴾

30. Mise waxay dhihi waa gabayaa ee aan la sugno Geerida.

أَمْ يَقُولُونَ شَاعِرٌ نَتَرَبِّصُ بِهِ عَيْبَ الْمُنُونِ ﴿٣٠﴾

31. Waxaad dhahdaa suga anna waan idin la sugiye.

قُلْ تَرَضُّوا لِي فِي مَعْرَفَةِ الْمُنَادِرِ بِصِينِ ﴿٣١﴾

32. Mise caqligooda (xun) yaa saas faray, ma aha ee waa Qoom xadgudbay.

أَمْ تَأْمُرُهُمْ أَحْلُمُهُمْ بِهَذَا أَمْ هُمْ قَوْمٌ طَاعُونَ ﴿٣٢﴾

33. Mise waxay dhihi isagaa abuurta (Quraanka) waxba ma ayan rumeynin.

أَمْ يَقُولُونَ نَقُولُهُ بَلْ لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٣﴾

34. Ha la yimaadeen hadal la mid ah hadday Run sheegi.

فَلْيَأْتُوا بِحَدِيثٍ مِثْلِهِ إِنْ كَانُوا صَادِقِينَ ﴿٣٤﴾

Ehlu-Jannaha Eebaa u nimeeyay, waxayna ku kulmi Jannada dhexdeeda iyagoo is warsan dhibaataadii adduunka iyo say Eebe uga cabsanjireen iyo siduu ugu naxariistay wanaagna ugu mannaystay, maxaa yeelay Ilaahay waa samafale, tan kale Nabigu (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) waa Raxmad Eebe soo diray, Jirro, waalli, iyo wax xumaan ahna ma qabo, Quraankuna waa kalaamkii Eebe, Haddii kale ha keeneen gaaladu iyo beenaalayaashu wax Hadalkii la mid ah ama ku soo dhaw, lagama yaabo taasna waligeed. Ad-Duur (25-34).

35. Mise waxaa la abuuray, abuure la'aan, mise iyagaa abuuray (naftooda).

أَمْ خُلِقُوا مِنْ غَيْرِ شَيْءٍ أَمْ هُمُ الْخَالِقُونَ ﴿٣٥﴾

36. Mise iyagaa Samaawaadka iyo Dhulka abuuray, saas ma aha ee wax ma ayan yaqiininin.

أَمْ خُلِقُوا السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بَلْ لَّا يُوقِنُونَ ﴿٣٦﴾

37. Mise agtoodaa khayraadka Eebe yaallaa, Mise iyagaa xisaabin dadka.

أَمْ عِنْدَهُمْ خَزَائِنُ رَبِّكَ أَمْ هُمُ الْمُصَيْطِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Mise waxay leeyihiin Sallaan ay wax ku Dhageeystaan, ha la yimaado kooda wax dhaagaystay xujo cad.

أَمْ لَهُمْ سُلُوفٌ لَمْ يَسْتَمِعُوا فِيهِ فَلَيَأْتِيَنَّهُمْ مَسْمِعُهُمْ يُسْأَلُونَ مِنْهُنَّ ﴿٣٨﴾

39. Mise Eebaa Gabdho u sugnaaday idinkana wiilal.

أَمْ لَهُ الْبَنَاتُ وَلَكُمُ الْبَنُونَ ﴿٣٩﴾

40. Mise waxaad warsan Nabiyouw ujuuro, oo markaas ku cuslaatay.

أَمْ لَسْتُمْ لَهُمْ آجْرًا فَهُمْ مِنْ مَقْرَمٍ مُتَقَلَّبُونَ ﴿٤٠﴾

41. Mise waxa maqanbaa agtooda ah oo ay qoraan.

أَمْ عِنْدَهُمُ الْغَيْبُ فَهُمْ يَكْتُمُونَ ﴿٤١﴾

42. Mise Dhagar Bay Rabaan, kuwa gaaloobay iyagaa dhakan.

أَمْ يُرِيدُونَ كَيْدًا فَالَّذِينَ كَفَرُوا هُمُ الْمَكِيدُونَ ﴿٤٢﴾

43. Mise Ilaah Eebe ka soo hadhay leeyihiin, Eebaa ka fog waxay la wadaajiyeen «Ilaah-nimada».

أَمْ لَهُمْ آلَاءٌ غَيْرُ اللَّهِ سُبْحَانَ اللَّهِ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٤٣﴾

Aayadahan waxay waran dilaa ah ku yihiin dhuunta gaalada, mulxidiinta ah iyo diinlaawayasha diidi oo inkiri Ilaaheenna wayn ee sharafta leh ee abuuray Caalamka iyo wax kasta, kuwaas doqommada ah ee isla waynida ku darsaday waxay inkiri Ilaaheen iyo abuurkiisa. Aayaduhuna waxay la hadli ciddii wax yar oo fikir ah ama caqli ah ku jirto, maxaa yeelay khalqiga, dadleh Cir leh ee dhul leh, ee Bad leh, ee Xiddigo leh ee xayawaan leh waxayna ka baxsanayn Saddex xaalo midkood.

1. Inay iska abuurmeen khaaliq abuuray la'aan.

2. Inay iyagu is abuureen Naftooda.

3. Iyo in cid kale abuurtaay oo ahaysiisay, tan hore iyo tan labaadba waa wax kama jiraan, Cid is abuurtayna ma jirto, mid iska abuurantayna ma jirto, wixii wax garad ahna ama caqli lehna saasuu rumaysanyahay, waxaa soo hadhay, tan sadexaad oo ah in cid wax abuurtaay jirto oo makhluuqaadka ka duwan, waana arrin dhab ah waana Ilaaheenna Caalamka ahaysiiyay xaggisana u ahaan, awoodna ku dhammaato, Mu'miniintuna ay rumasayihiin wanaagna ku abaalmarin.

Bukhaari iyo Muslim waxay ka wariyeen Jubayr Binu Mudhcim inuu yidhi: Waxaan maqlay nabiga oo makhrib akhrin (Suuradda) Duur markuu gaadhay Aayaddan (Mise waxaa la abuuray Abuure la'aan): Qalbigaygu wuxuu u dhawaaday inuu duulo. Ad-Duur (35-43).

44. Hadday arkaan goosin ka mid ah Samada oo soo dhacaysa waxay odhan waa Daruuro is dulsaaran (madax adayg dartiis).

وَإِنْ يَرَوْا كِسْفًا مِنَ السَّمَاءِ سَاقِطًا يَقُولُوا سَحَابٌ مَرْكُومٌ ﴿٤٤﴾

45. Ee iskaga tag Nabiyouw intay kala kulmaan maalinta dhexdeeda lagu ha-laagi doono.

فَدَرَهُمْ حَتَّىٰ تَلَاقُوا يَوْمَهُمُ الَّذِي فِيهِ يُصْعَقُونَ ﴿٤٥﴾

46. Maalinta ayan dhagartoodu wax u taraynin wax u gargaarana uusan jirin.

يَوْمَ لَا يَنفَعِي عَنْهُمْ كَيْدُهُمْ شَيْئًا وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٤٦﴾

47. Kuwa xad gudbay waxaa u sugnaaday caddibaad ka sokaysa (Qiyaamada), laakiin badankoodu ma oga.

وَأَنَّ الَّذِينَ ظَلَمُوا عَدَابًا دُونَ ذَلِكَ وَلَكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٤٧﴾

48. Ee ku samir xukunka Eebbahaa (Nabiyow) annagaa ku ilaalinaynee, kuna tasbiixso oo ku mahadi Eebbahaa markaad kici.

وَأَصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ فَإِنَّكَ بِأَعْيُنِنَا وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ حِينَ تَقُومُ ﴿٤٨﴾

49. Habeenka qaarkiisna tuko, iyo marka xiddiguha jeedsadaan.

وَمِنَ اللَّيْلِ فَسَبِّحْهُ وَإِدْبَارَ النُّجُومِ ﴿٤٩﴾

Madax adaygu gaalo wax u tarimahayo marka ciqaabta Eebe timaaddo, khiyaamo, dhagar iyo xummanna Eebe wax kama dhibto, ee waxay wax yeeli cidda la timid uun, Adduunkana Eebe waa karaa inuu ku ciqaabo xummanlowga (sida dhacda in badan). Aakhirana waa u dheertahay ciqaabteedii, waxaase Eebe Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) faray ummaddiisuna waa la mide inuusan u walbahaarin xumaanlowga ee uu xaqa tusaa, kuna samraa, kaddibna wax kama dhibayso ciddii dhunta, maxaayeelay Eebaa awoodda leh, waana in tasbiixda Eebe, mahaddiisa, Salaadda iyo ka yaabiddiisana la badiyo si kastoo la yahayba. Ad-Duur (44-49).



Suurat An-Najm



Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Wuxuu ku dhaartay (Eebe) Xiddiggu markuu hoobto.

وَالنَّجْمِ إِذَا هَوَىٰ ①

2. Ee saaxiibkiin (Nabigu) ma dhumin, xaqana kama leexan.

مَا صَلَّ صَاحِبِكُمْ وَمَا عَوَىٰ ②

3. Kamana hadlo hawadiisa.

وَمَا يَنْطَوِّنَ عَنْ الْهَرَىٰ ③

4. quraankuna waxaan waxyi Eebe ahayn ma aha.

إِنْ هُوَ إِلَّا وَحْيٌ يُوحَىٰ ④

5. Waxaana wax baray (oo xagga Eebe ka soo gaadhsiiyay) ku xoog wayn, (Malaku Jibriil).

عَلَّمَهُ شَدِيدُ الْقُوَىٰ ⑤

6. Ee caafimaad iyo quwaba leh, abuuriddiisuna egtahay.

ذُو مِرَّةٍ فَاسْتَوَىٰ ⑥

7. Wuxuu joogay jihadii sare (Jibriil).

وَهُوَ بِالْأُفُقِ الْأَعْلَىٰ ⑦

8. Kaddibna u soo dhawaaday kuna soo hoobtay (Nabiga).

ثُمَّ دَنَا فَتَدَلَّىٰ ⑧

9. Intuu uga jirsado Qaanso (xadhigeed) ama ka dhaw.

فَكَانَ قَابَ قَوْسَيْنِ أَوْ أَدْنَىٰ ⑨

10. Wuxuuna Eebe u waxyooday Adoonkiisa (Nabiga) wuxuu u waxyooday.

فَآوَىٰ إِلَىٰ عِبْدِهِ مَا أَوْحَىٰ ⑩

Eebe wuxuu ku dhaartaa wuxuu doono oo khalqigiisa ka mid ah, Addoomadiisuna kuma dhaartaan waxaan isaga ahayn, siduu sheegay Sheekh Shacbi. Eebana wuxuu halkan ku dhaartay Xiddiggu markuu hooban, in Nabigu toosanyahay, xaqna ku hadlo wuxuu sheegina uu yahay wax Eebe ku soo dajiyay uguna soo dhiibay malaku Jibriil, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) had iyo jeer marka waxyi soo daga wuxuu la kulmi jiray Malaku Jibriil, taasina waxay tummaato ku tahay gaalada iyo xaq diidayaasha diidi xaqnimada Quraanka.

Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu yidhi: «Anugu kuma hadlo waxaan xaq ahayn». Waxaa wariyay Imaam Axmad binu xambal. An-Najm (1-10).

11. Qalbiguna Ma beeniin wuxuu arkay (Nabigu).

مَا كَذَّبَ الْفُؤَادُ مَا رَأَى ﴿١١﴾

12. Ee ma idinkaa kula murmi «kana doodi» wuxuu arkay.

أَفَسَمُرُونَهُ، عَلَى مَا رَأَى ﴿١٢﴾

13. Dhabnimuu Nabigu u arkay Jibriil mar kale.

وَلَقَدْ رَآهُ نَزْلَةً أُخْرَى ﴿١٣﴾

14. Sidratul-Muntaha agteeda.

عِنْدَ سِدْرَةِ الْمُنْتَهَى ﴿١٤﴾

15. Agteedana waxaa ah Jannatul-ma'waa.

عِنْدَهَا جَنَّةُ الْمَأْوَى ﴿١٥﴾

16. (Wuxuu arkay) waqtiguu daboolayay Sidrada wax dabool.

إِذْ يَغْشَى السِّدْرَةَ مَا يَغْشَى ﴿١٦﴾

17. Aragguna kama iilan wuxuu arkay (Nabigu) mana xadgudbin.

مَا رَأَى مِنَ الْأَنْصَارِ وَمَا طَغَى ﴿١٧﴾

18. Dhabnimo yuuna u arkay (Nabigu) Aayado Eebe oo waawayn.

لَقَدْ رَأَى مِنْ آيَاتِ رَبِّهِ الْكُبْرَى ﴿١٨﴾

19. Ka warrama (Sanamyada) Laata iyo Cuza.

أَفَرَأَيْتُمُ اللَّاتَ وَالْعُزَّىٰ ﴿١٩﴾

20. Iya Manaatadii saddexaad ee kale.

وَمَنْوَةَ الثَّالِثَةَ الْاُخْرَىٰ ﴿٢٠﴾

21. Idinku ma waxaad leedihiin Lab Eebana Dhaddigga.

الْكُورَ الذِّكْرَ وَلَهُ الْأُنْثَىٰ ﴿٢١﴾

22. Taasi waa qayb dulan ah.

بَلْكَ إِذَا قِسْمَةٌ ضِيزَىٰ ﴿٢٢﴾

23. Sanammaduna magacyo aad magacowdeen idinka iyo Aabayawgiin mooyeen wax kale ma aha, wax xuja ahna Eebe uma soo dajinin, waxaan mala ahayna ma raacayaan iyo waxa naftoodu doonto, xagga Eebana waxaa uga yimid hanuun.

إِنَّ هُنَّ إِلَّا أَسْمَاءٌ سَمِيَّتُهُمْ أَنْثَرُ وَأَبَاؤُكُمْ مَا أَنْزَلَ
اللَّهُ بِهِمَا مِنْ سُلْطَانٍ إِنْ يَتَّبِعُونَ إِلَّا الظَّنَّ وَمَا تَهْوَى
الْأَنْفُسُ وَلَقَدْ جَاءَهُمْ مِنْ رَبِّهِمْ الْهُدَىٰ ﴿٢٣﴾

Nabigu (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu arkay Malaku-Jibriil oo soo gaadhsiiinayay waxyiga Eebe marar badan, sidaan (horayba u soo sheegnay) shakina kuma jiro siduu Nabigu Jibriil u arkay, sida oo kale wuxuu arkay Nabigu Aayada waawayn oo Eebe, maxayse Sanamyo ama wax ha garteen ama yay wax garannine la caabudo ama la raaco tari, waa uun halaag iyo luggooyo, illeen Xagga Ilaaheenbaa inooga yimid Nuur iyo hanuun ay waajib tahay in la raaco. An-Najm (11-23).

24. Mise dadka waxaa u sugnaaday waxay yididiishaan.

أَمْ لِلْإِنْسَانِ مَا تَمَىٰ ﴿٢٤﴾

25. Aakhiro iyo Adduunba Eebaa iska leh.

فَلْيَلْهُ الْآخِرَةُ وَالْأُولَى ﴿١٥﴾

26. Badanaa Malag Samada ku sugan oon shafecadiisu waxba anfacyaynin in Eebe idmo mooyee, Cidduu la doono oo ka raalli noqdo.

*وَمَنْ مَلَكَ فِي السَّمَوَاتِ لَا تَعْنِي سَفَعَتُهُمْ
شَيْئًا إِلَّا أَمْرًا يُعَدُّ أَنْ يَأْتِيَ اللَّهُ لَمَنْ يَشَاءُ وَيَرْضَى ﴿١٦﴾

27. Kuwa aan rumaynin Aakhiro waxay Malaa'igta ku magacaabi magac dhad-dig.

إِنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ لَيُسَمُّونَ الْمَلَائِكَةَ
تَسْمِيَةً الْأُنثَى ﴿١٧﴾

28. Wax cilmi ahna uma laha, ee waxay raaci mala uun, malana xaqa wax kama taro.

وَمَا لَهُمْ بِهِ مِنْ عِلْمٍ إِنْ يَخْتَرُونَ إِلَّا الظَّنُّ وَإِنْ الظَّنُّ
لَا يُغْنِي مِنَ العَمَى شَيْئًا ﴿١٨﴾

29. Ee iskaga jeedso (nabiyow) Ruux ka tagay xuskayga (Quraanka) oon doonin waxaan nolosha Adduunka ahayn.

فَأَعْرَضَ عَنْ مَنْ تَوَلَّى عَنْ ذِكْرِنَا وَلَوْ يُرِيدُ إِلَّا الْآخِرَةَ
الدُّنْيَا ﴿١٩﴾

30. Kaasina waa garaadkooda aqooneed intuu gaadhay, Eebana waa ogyahay cidda ka dhuntay jidkiisa, waana ogyahay cidda hanuunsan.

ذَلِكَ مَبْلَغُهُمْ مِنَ العِلْمِ إِنَّ رَبَّكَ هُوَ اعْلَمُ بِمَنْ صَلََّ عَنْ
سَبِيلِهِ وَهُوَ اعْلَمُ بِمَنْ أَهْتَدَى ﴿٢٠﴾

Ruuxna siduu doona uun xaalku ma noqdo, ee waa sida amarka Eebe ku fulo, maxaayeelay Aakharo iyo Adduunba Eebaa iska leh, xataa Malaa'igtu waxaan Eebe fasixin ma samayn karto, cidna uma shafeeci karto idanka Eebe mooyee.

Eebana siduu meelo badan oo Quraanka ah ku sheegay uma baahna ehel iyo carruur midna, maxaayeelay khalqiga dhammaantiisba isagaa iska leh, markaas maxay gaaladu u sheegi in malaa'igtu gabdho Eebe yihiin, wax ma oga ee waxay ku socdaan male, muxuuse tari male.

Nabiguna (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu ku yidhi hadalkiisii saxiixa ahaa (Iska jira malaha, maluhu waa ka u Been-san hadale).

Eebana wuxuu Nabiga faray inuusan ku daba luggo'in kuwa xaqa ka jeedsaday ee cilmigoodii ku koobtay Adduunyo ladaba ordaa uun, waxaa la Wariyay Caa'isha Hooyadii Mu'miniinta ahayd, «Eebe ha ka raalli noqdee» inay tidhi: Rasuulkii Eebe Laga wariyay (Ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee): Adduunka waa guriga Ruuxaan guri lahayn, iyo Xoolaha Ruuxaan Xoola lahayn, waxaana wax u kulmista Ruuxaan Caqli lahayn. waxaa sheegay Imaam Axmad (mana xoog badna).

An-Najm (24-30).

31. Samaawaadka iyo Dhulka waxa ku sugan Eebaa iska leh, si uu uga abaal-mariyo kuwa xumaanta falay camal-koodii, ugana abaal-mariyo kuwii wanaagga falay wanaag.

وَلِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ لِيَجْزِيَ الَّذِينَ
أَسْتَوْفُوا عَمَلَهُمْ وَلِيَجْزِيَ الَّذِينَ أَحْسَنُوا بِالْحُسْنَى ﴿٢١﴾

32. Waana kuwa ka fogaada dambiga waawayn iyo xumaanta, wax yaryar mooyeen, Eebana waa waasac dambid-

الَّذِينَ يَجْتَنِبُونَ كَثِيرَ الْإِسْمَاءِ وَالْفَوَاحِشِ إِلَّا اللَّمَمَ
إِنَّ رَبَّكَ وَسِعَ الْعَفْوَ هُوَ اعْلَمُ بِكُمْ إِذَا شَاءَ كَرَّمُ

haafkiisu, wuuna idin ogyahay markuu idinka abuuray Dhulka iyo markaad ku asturantihiiin uurka hooyadiin, ee Naftiinna ha ammaanina Eebaa og cidda dhawrsashada badane.

مِنَ الْأَرْضِ وَإِذَا نُفِثَ بَنُو أُمَّهِمْ فَمَا
تَزُورُوا أَفْسَهُمْ هُوَ أَعْلَمُ بِمَنِ اتَّفَقَ ﴿٣١﴾

33. Ka warrama midka xaqa ka jeedsaday.

أَفْوَيْتَ الَّذِي تَوَلَّى ﴿٣٣﴾

34. Oo yar bixiyay inta kalana reebtay.

وَأَعْطَى قَلِيلًا وَأَكْدَى ﴿٣٤﴾

35. Ma agtiisaa cilmiga maqan yaallaa oo wuu arkaa.

أَعِنْدَهُ عِلْمُ الْغَيْبِ فَهُوَ بِرَأْيِهِ ﴿٣٥﴾

Mar hadduu Eebe cirka, Dhulka, iyo makhluuqaadka dhammaantiisba leeyahay, uuna cidwalba ka abaal marin falkeeda uuna addoomihiisa ka saamixi gafafka yaryar, oo naxariistiisu waasac tahay, wax walbana ogyahay marka Ruuxa la abuurto iyo goorkastaba, soo ma wanaagsana in wanaagga lagu dadaalo, xumaanta, islawaynida, iyo naftii ammaankana laga fogaado.

Maxammad binu camar ibnu-Cadhaa'a wuxuu yidhi, (waxaan ku magacaabay gabadh tay ah: Barrata, markaasay igu tidhi Saynab binti Abii Salamata: Rasuulkii Eebe wuxuu reebay magacan, adna waxaad ku magacawday Barrata, markaasuu Rasuulkii Eebe (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yelee) yidhi: (Naftiinna ha ammaanina Ilaahay waa ogyahay Cidda baarriga ah oo idin ka midah markaasay dheheen maxaan ku magacawnaa? wuxuuna yidhi: ku magacaaba Saynab. waxaa wariyay Muslim. wuxuuna Nabigu reebay in dadka ammaanta lagu badiyo, ee kahyrka iyo wanaagga uuna ha la badsado iyagaa ammaan ugu filane. An-Najm (31-35).

36. Miyaan looga warramin (dadka) wixii ku yiillay Kitaabkii (Nabi Muuse).

أَمْ لَمْ يُبَيِّنْ بِنَامِي فِي صُحُفٍ مُّوسَىٰ ﴿٣٦﴾

37. Iyo kii (Nabi Ibraahimkii) ee oofiyay (wixii lafaray).

وَإِبْرَاهِيمَ الَّذِي وَفَّى ﴿٣٧﴾

38. Inaan nafna dambi naf kale qaadaynin.

الْأَقْدَرُ وَأَزْرُهُ وَرَدَّ آخِرَتِي ﴿٣٨﴾

39. Ruuxna wuxuusan camalfalin heleeynin.

وَأَنْ لَّيْسَ لِلْإِنْسَانِ إِلَّا مَا سَعَىٰ ﴿٣٩﴾

40. Camalkiisana la arki doono.

وَأَنْ سَعَىٰهُ سَوْفَ يَرَىٰ ﴿٤٠﴾

41. Ka dibna looga abaalmarin doono si buuxda.

ثُمَّ يُجْزَاهُ الْجَزَاءَ الْأَوْفَىٰ ﴿٤١﴾

42. Eebaa xaggiisana loo ahaan.

وَأَنْ إِلَىٰ رَبِّكَ الْمَسْتَهَيِّجِ ﴿٤٢﴾

43. Eebe waakan wax ka qosliya kana oohiya.

وَأَنَّهُ هُوَ أَضْحَكَكَ وَأَبْكَىٰ ﴿٤٣﴾

44. Isagaana wax dila waxna nooleeya.

وَأَنَّهُ هُوَ أَمَاتٌ وَأَحْيَا ﴿٤٤﴾

45. Isagaana abuuray labada nooc ee ah lab iyo dhaddigba.

وَأَنَّهُ خَلَقَ الزَّوْجَيْنِ الذَّكَرَ وَالْأُنثَىٰ ﴿٤٥﴾

46. Kana ahaysiiyay dhibic soo baxday. ﴿٤٦﴾ مِنْ نُّطْقَةٍ إِذَا نُمِتْنِي
47. Isagaana ahaysiin soo celinta kale. ﴿٤٧﴾ وَإِنَّ عَلَيْهِ النَّسَاءَ الْأُخْرَى
48. Eebe isagaa wax Hodmiya isagaana wax faqiiriya. ﴿٤٨﴾ وَإِنَّهُ هُوَ أَعْنَى وَأَقْنَى
49. Waana Eebaha xiddigga Shicra. ﴿٤٩﴾ وَإِنَّهُ هُوَ رَبُّ الشِّعْرَى

Aayadahani waxay caddayn sida Aayado badan oo kalaba in Naf walba laga abaal-marin waxay camal fasho, Nafna naf kale dambigeed ayna qaadaynin, Ruux walbna uu arki camalkiisa, xaalkuna wuxuu ku dhammaan Eebe xaggiisa.

Camar binu maymuun waxaa laga wariyay inuu yidhi: waxaa na dhex istaagay Macaad binu Jabal wuxuuna yidhi: Ree Awdoo waxaan ahay farriintii Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) idiin soo diray, waadna ogtihiin in Eebe loo ahaan, ama Janno ama Naar, waxaa wariyay Ibnu Abi Xaatiim.

Eebana waa ka qosliyaha, ka oohiyaha, dilaha, nooleeyaha, abuuraha, soo celiyaha, Hodmiyaha, faqiiriyaha, iyo Eeba-ha Makluuqaadka dhammaantood, ee waa in Ruux walba uu u darbadaa inuu la kulmi camalkiisa, macaan iyo khadhaadhba. An-Najm (36-49).

50. Eebe isagaa halaagay Caadkii hore. ﴿٥٠﴾ وَإِنَّهُ أَهْلَكَ عَادًا الْأُولَى
51. Iyo Thamuudba waxna kama ree-bin. ﴿٥١﴾ وَصَمُودًا قَوْمًا آبَائِي
52. (Nabi Nuux) Qoomkiisiina horuu (uhalaagay), waxayna ahaayeen kuwa dulmi badan oo xadgudub badan. ﴿٥٢﴾ وَقَوْمِ نُوحٍ مِنْ قَبْلُ إِنَّهُمْ كَانُوا هُمْ أَظْلَمَ وَأَطْفَى
53. Qoomkii (Nabi Luudna) wuu riday (Eebe). ﴿٥٣﴾ وَالْمُؤْتَفِكَةَ أَهْوَى
54. Wuxuuna ku daboolay wuxuu ku daboolay (oo caddibaad ah). ﴿٥٤﴾ فَعَسَّهَا مَا عَسَى
55. Teebaadse nicmooyinka Eebe sha-kinaysaan (kana doodaysaan) dadow. ﴿٥٥﴾ فَيَأْتِيءُ الْآءَ رَبِّكَ تَتَمَارَى
56. Kan (Nabiga iyo Quraankuba) waa dige ka mid ah u digayaashii hore. ﴿٥٦﴾ هَذَا نَذِيرٌ مِنَ النَّذِيرِ الْأُولَى
57. Wayna dhawaatay Saacaddi Qiyaame. ﴿٥٧﴾ أَرَفَتِ الْأَرْفَةَ
58. Wax Eebe ka soo hadhay oo ogna ma jiro (markay dhici). ﴿٥٨﴾ لَيْسَ لَهَا مِنْ دُونِ اللَّهِ كَاشِفَةٌ
59. Ma quraankanaad la yaabban tihiin. ﴿٥٩﴾ أَقِنِ هَذَا الْحَدِيثَ تَعَجُّبُونَ
60. Ood qoslaysaan (idinkoo beenin) ﴿٦٠﴾ وَتَصْحَكُونَ وَلَا تَتَكُونَ

oydaanna ooyeynin (cabsi darteed).

61. Idinkoo waliba hilmaansan (islana wayn).

وَأَنْتُمْ سَلَمُونَ ﴿٦١﴾

62. Ee dadow Eebe u sujuuda caabudana.

فَأَسْجُدُوا لِلَّهِ وَأَعْبُدُوا اللَّهَ ﴿٦٢﴾

Eebe awooddiisa yaa wax walba ku jiraa, hadduu doonana wuu halaagaa Cidduu doono sida kuwaas Quraanku in badan ka warramay oo kale, maxaa yeelay way kibreen, Nicmada Eebana way beeniyeen iyo xaqaba, saas daraaddeed waa in Eebe laga yaabo, Qiyaamadana loo darbado, Quraankana la rumeeyo, kibir, isla wayni iyo qosol xaq ku beeninna la iska jiro, Sujuudda Eebe iyo cibaadadiisana la badiyaa, iyo xumaantaada oo laga ooyaa. Ibni Cabbaas wuxuu yidhi: waxaa Sujuuday Nabiga (Ammaan iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) (markuu akhriyay) «An-Najm» waxaana la sujuuday Muslimiintii, Mushrikiintii, Jinni iyo insiba. waxaa wariyay Bukhaari. An-Najm (50-62).



Suurat Al-Qamar

سُورَةُ الْقَمَرِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa dhawaatay Saacaddii (Qiyaame), dayixiina wuu dillaacay.

أَقْرَبَتِ السَّاعَةُ وَأَنْسَقَ الْقَمَرُ ﴿١﴾

2. Hadday Gaaladu arkaan Aayad way ka jeedsadaan waxayna dhahaan waa Sixir daran.

وَلَنْ يَرَوُا آيَةَ يُعْرِضُونَ وَيَقُولُوا سِحْرٌ مُّسْتَمِرٌّ ﴿٢﴾

3. Way beeniyeen (Nabiga iyo xaqa) waxayna raaceen Hawadooda, amar kastana wuxuu leeyahay meel uu ku sugnaado.

وَكَذَّبُوا وَاتَّبَعُوا أَهْوَاءَهُمْ وَكُلُّ أَمْرٍ مُّسْتَقَرٌّ ﴿٣﴾

4. Waxaana ugu yimid dhab ahaan warar ku dheehan waano.

وَلَقَدْ جَاءَهُمْ مِنَ الْأَنْبَاءِ مَا فِيهِ مُرْدَجٌ ﴿٤﴾

5. Waana Xigmad xeel dheer, maxaysa tari udigidi.

حِكْمَةٌ بَالِغَةٌ فَمَا تُغْنِ التُّذُرُ ﴿٥﴾

6. Ee iskaga jeedso (sugna) Maalinta mid dhawaaqaa uu ugu yeedhi wax daran.

فَتَوَلَّ عَنْهُمْ يَوْمَ يَدْعُ الدَّاعِ إِلَى شَيْءٍ نُّكْرٍ ﴿٦﴾

7. Araggooduna wuu dullaysnaan, waxayna ka soo bixi Qubuurahooda iya-good moodid Ayax faafay.

خُنُوعًا أَبْصَرُهُمْ يَخْرُجُونَ مِنَ الْأَجْدَانِ كَأَنَّهُمْ جَرَادٌ مُّنتَشِرٌ ﴿٧﴾

8. Iyagoo u dagdagi dhawaaqaha xaggiisa, waxayna dhihi Gaaladu kani waa Maalin daran.

مُهْطِعِينَ إِلَى الدَّاعِ يَقُولُ الْكٰفِرُونَ هَذَا يَوْمٌ عَسِرٌ ﴿٨﴾

Calaamooyinka Qiyaamada waxaa ka mid ah soo bixintii (Nabiga) (Amaan iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee).

Gaaladuna wax kastoo ku tusin xaqnimada (Nabiga) «oy arkaanba way beeninayeen, iyagoo sixir iyo xumaanba ku sheegi, wax walbase meel uu ku dhammaaduu leeyahay, waase in la waana qaato lana raaco xigmada Quraanku sheegi inta ka horraysa Qiyaamada iyo abaal-marinta loona darbado Maalintaas wayn.

Waxaa laga wariyay Khaalid binu Cumayr inuu yidhi: waxaa khudbad noo akhriyay Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee» Eebuuna ku mahadiyay kor ahaaye, wuuna ammaanay waxuuna yidhi (intaa ka dib Adduunyadii waxay ogaysiisay goyn, wayna jeedstay, kamana

hadhin wax yar mooyee oo la mid ah weel wax ku hadhay oo Ruuxu qaadanayo, waadna ka guuraysaan xaggeeda una guuraysaan Daar aan tagaynin, ee ka guura idinkoo wata camalkiinna khayrka badan, waxaa naloo sheegay in dhagax lagu tuuray salka Jahannamo uuna sii socon Toddoobaatan Sano isagoon salka gaadhin, Wallahi in la buuxin, Ma la yaabteen? Wallaahi waxaa naloo sheegay in Jannada labadeeda Albaab loo socdo Afartan Sano, waxaana iman Maalin ay cidhiidhi la buuxdo. Waxaa wariyay Imaam Axmad Binu Xambal. Al-Qamar (1-8).

9. Waxaa beeniyay (xaqa) iyaga hortood (Nabi) Nuux Qoomkiisii, waxay beeniyeen Addoonkannagii, waxayna dheheen wuu waalanyahay, waana la guulguulay, «oo la canaantay».

* كَذَّبَتْ قَوْمَهُمْ نُوحٌ فَاذْبُوا عَبْدَنَا وَقَالُوا
مَجْنُونٌ وَارْدُجِرَ ⑩

10. Eebuuna tuugay inuu tabar yahay oo u gargaaro.

فَدَعَا رَبَّهُ أَنِّي مَغْلُوبٌ فَانْتَصِرَ ⑪

11. Markaasaan ku furray Albaabbada Samada (Cirka) Biyo badanna ka keenay.

فَفَتَحْنَا أَبْوَابَ السَّمَاءِ بِمَاءٍ مُنْهَمِرٍ ⑫

12. Dhulkana Eebe ka dillaaciyay ilo, wayna kulmeen biyihii amar la qadaray dartiis.

وَفَجَّرْنَا الْأَرْضَ عُيُونًا فَاتْتَمَّى الْمَاءُ عَلَى أَمْرٍ قَدْ
قُدِّرَ ⑬

13. Waxaanna ku xambaarray Nabi Nuux (Doon) Looxyo iyo Musbaarro leh.

وَحَمَلْنَاهُ عَلَى ذَاتِ الْأَوْجِ وَدُسِّرَ ⑭

14. Kuna socota ilaalintannada si loo abaalmaryo cidda Gaalowday.

تَجَرَّى بِأَعْيُنِنَا جَزَاءَ لِمَنْ كَانَ كُفِرَ ⑮

15. Waxaan uga tagnay (yuu Eebe yidhi) Calaamad (lagu waantoobo) ee ma jirtaa cid wacdoomi (oo wax xusuusan).

وَلَقَدْ تَرَكْنَاهَا آيَةً فَهَلْ مِنْ مُدَكِّرٍ ⑯

16. Seese yahay Caddib Eebe iyo digiddiisu.

فَكَيْفَ كَانَ عَنَابِي وَنُدِيرٍ ⑰

17. Waan fududaynnay Quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid wacdoomi.

وَلَقَدْ بَشَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَكِّرٍ ⑱

Qisada (Nabi) Nuux iyo qoomkiisii wax badanbuu Quraanku sheegay, si loogu waana qaato, falkoodii xumaana looga leexdo, samaantana la falo, Quraanka Eebe fududeeyayna la raaco, laguna dhaqmo wanaaguu u yeedhi. Ibnu-Cabbaas wuxuu yidhi: Haddaan Eebe u sahlin Quraanka Carrabka Aadamiga Ruux khalqiga ka mid ah ma kareen inuu ku hadlo kalaamka Eebe. Al-Qamar (9-17).

18. Caadna way beenisay (xaqii), seese noqotay caddibaaddii Eebe iyo u digid-diisii.

كَذَّبَتْ عَادٌ فَكَيْفَ كَانَ عَدَايَ وَنُذِرٍ ﴿١٨﴾

19. Waxaan ku dirray korkooda dabayl qabaw daran Maalin baasaysan dhex-deed oo Joogta ah.

إِنَّا أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِيحًا صَرْصَرًا فِي يَوْمِ نَحْسٍ مُّسْتَمِرٍّ ﴿١٩﴾

20. Oo dadka siibaysa sida Timir gunteedii la rujiyay.

تَنْزِيلِ النَّاسِ كَأَنَّهُمْ عَجَائِدٌ تُخَلِّ سُنْعِيرٍ ﴿٢٠﴾

21. Seese ahaa caddibaaddii Eebe iyo u digiddiisii.

فَكَيْفَ كَانَ عَدَايَ وَنُذِرٍ ﴿٢١﴾

22. Waxaan u fududaynay Quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid ku wacdoomi.

وَلَقَدْ بَيَّنَّاتُ الْآيَاتِ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُّذَكِّرٍ ﴿٢٢﴾

23. Waxaa beenisay (xaqii) loogu digay Thamuud.

كَذَّبَتْ ثَمُودُ بِالنُّذُرِ ﴿٢٣﴾

24. Waxayna dheheen ma Ruux dad ah oo naga mid ah yaan raacaynaa, markaas waxaan ku sugannahay baadi iyo dhibaato.

فَقَالُوا أَبَشْرًا مِّمَّا وَتَّيَعْتُهُ إِنَّا إِذًا لَنَلِي صَلَالٍ وَسُعْرِ ﴿٢٤﴾

25. Ma isagoo na dhexjoogaa waxyi lagu soo dajiyay, saas ma aha ee waa beenbadane kibirlow ah.

أَلَيْسَ الذِّكْرُ عَلَيْهِمْ مِنْ بَيْنِنَا بَلْ هُوَ كَذَابٌ أَشْرٌ ﴿٢٥﴾

26. Way ogaan doonaan barri cidda beenbadane kibirlow ah.

سَيَعَاوَنُونَ عَدَاؤَنَا مِنَ الْكُذَّابِ الْأَشْرِ ﴿٢٦﴾

27. Hashii Annagaa soo bixinnay Jir-rabkooda dartiis, Ee sug kuna samir.

إِنَّا مُرْسِلُوا النَّافِ وَفَشَنَهُ لَهُمْ فَاتَّقِهُمْ وَأَصْطَبِرْ ﴿٢٧﴾

28. Una warran in biyuhu yihiin qayb (iyaga iyo Hasha), cidbana maalin gaara leedahay).

وَيَنْبَغُونَ الْمَاءَ قِسْمًا بَيْنَهُمْ كُلُّ شَرْبٍ مُّخْتَصِرٌ ﴿٢٨﴾

29. Waxay u dhawaaqeen saaxiibkood hashiina wuu dilay.

فَنَادُوا صَاحِبَهُمْ فَتَعَاطَى فَعَقَرَ ﴿٢٩﴾

30. Seese ahaa caddibaaddii Eebe iyo u digiddiisii.

فَكَيْفَ كَانَ عَدَايَ وَنُذِرٍ ﴿٣٠﴾

31. Dhawaaq kaliyaan ku sii daynay, waxayna la mid noqdeen jabad burburay.

إِنَّا أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ صَيْحَةً وَاحِدَةً فَكَانُوا كَهَشِيمِ الْمُخْتَطِرِ ﴿٣١﴾

32. Quraankana waan u fududaynay xusuus darteed ee ma jirtaa cid ku wacdoomi.

وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَكِّرٍ ﴿٣٢﴾

Qisooyinkan iyana saasoo kale yuu Quraanku meela badan ugu sheegay, Murtiduse waa in wanaag la raaco, xumaanta iyo madax adayggana laga leexo iyo ma ruux banii Aadam ah yaa na hanuunin, xaqa umbaa wax la raaca ah. Al-Qamar (18-32).

33. Way beeniyeen Qoomkii (Nabi-Luud) u digiddii.

كَذَّبَتْ قَوْمُ لُوطٍ بِالَّذُرِّ ﴿٣٣﴾

34. Waxaana ku dirray korkooda Dabayl Dhagaxyo wadata, waxaanse ka nabadgalinnay (Luud) ehelkiisii (ru-meeyay) goor Aroor ah.

إِنَّا أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ حَاصِبًا إِلَّا آلَ لُوطٍ
نَجَّيْنَاهُمْ لَمَسَعَةٍ ﴿٣٤﴾

35. Nicmad xaggannaga ka timid darteed, saasaanna u abaalmarinnaa ciddii mahadisa (Eebe).

بِعَمَلِهِمْ مِنْ عِنْدِنَا كَذَلِكَ نَجْزِي مَنْ شَكَرَ ﴿٣٥﴾

36. Nabi-Luud wuxuu uga digay qoomkiisii qabashadannada (daran), wayse shakiyeen digiddaas.

وَلَقَدْ أَنْذَرَهُمْ بَطْشَتَنَا فَتَمَارَوْا بِالَّذُرِّ ﴿٣٦﴾

37. Waxayna dooneen martidiisii (inay xumeeyaan) markaasaan indhaha tirray, waxaana lagu yidhi dhadhamiya caddibaadda Eebe iyo digiddiisa.

وَلَقَدْ رَاوَدُوهُ عَنْ صَافِيَةٍ فَلَمَسَهَا أَعْيُنُهُمْ فُدُّوْا
عَدَائِي وَبُذِّرَ ﴿٣٧﴾

38. Waxaa ku waabariistay caddibaad sugan.

وَلَقَدْ صَبَّحَهُمْ بُكْرَةً عَذَابٌ مُسْتَقِرٌّ ﴿٣٨﴾

39. Waxaana lagu yidhi dhadhamiya caddibaadda Eebe iyo digiddiisa.

فَدُّوْا عَدَائِي وَبُذِّرَ ﴿٣٩﴾

40. Waan fududaynay Quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid wacdoomi.

وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَكِّرٍ ﴿٤٠﴾

41. Fircoon iyo ehelkiisii waxaa u yimid digid.

وَلَقَدْ جَاءَهُمْ آلُ فِرْعَوْنَ الذُّرُّ ﴿٤١﴾

42. Wayna beeniyeen Aayaadkannagii dhammaanteed, markaasaan u qaban-nay si xoog iyo awood leh.

كَلَّا يَا بَنِيَّ إِنَّا كَالَّذِينَ خَلَّفْنَا فِي الْأَرْضِ أَن يُسَيَّرُوا
مِنَّا وَإِنَّا كَالَّذِينَ نَحْنُ الْمُهْتَدُونَ ﴿٤٢﴾

Sidoo kale Qoomkii Nabi-Luud iyo falkoodii xumaa, iyo Fircoon iyo islawaynankiisii wax badan bay Quraanka ku soo aroreen, mana qarsoona waxay ku dambeeyeen, xumaanlowna saas ha fisho. Al-Qamar (33-42).

43. Ma Gaaladiinnan baa ka khayr badan kuwaas mase dambi la'aanbaa idiin ku sugan Kutubta. ﴿١٣﴾ أَكْفَأُنْ رُحَمَاءَ بَنِي إِسْرَائِيلَ أَمْ أَوْلِيَاءَ لَمَّا أَتَتْكُم مَّوَدَّةُ بَنِي إِسْرَائِيلَ فِي الرَّبْرِ
44. Mase waxay dhihi koox guulaysan yaann ahay. ﴿١٤﴾ أَرَيْفُؤُنْ تَحْنُ جَمِيعٌ مُنْتَصِرٌ ﴿١٤﴾
45. Waa la jabin kooxda, Dabadayna jeedin. ﴿١٥﴾ سَبَّحُوا بُرُوجَهُمْ وَبَدَّوْنَ الدُّبُرَ ﴿١٥﴾
46. Saacadda (Qiyaame) yaa ballan u ah, Saacadduna iyadaa daran oo khadhaadh. ﴿١٦﴾ بَلِ السَّاعَةُ مَوْعِدُهُمْ وَالسَّاعَةُ أَذَى وَأَمْرٌ ﴿١٦﴾
47. Kuwa dambiilayaasha ah baadi iyo fogaansho yay ku sugan yihiin. ﴿١٧﴾ إِنَّ الْمُجْرِمِينَ فِي صَلَائِلٍ وَسُغُرٍ ﴿١٧﴾
48. (Waxaana lagu dhihi) Maalinta Naarta Waji Waji loogu ridi dhadhamiya taabashada Saqara. ﴿١٨﴾ يَوْمَ يُسْحَبُونَ فِي النَّارِ عَلَى وُجُوهِهِمْ ذُوقُوا مَسَّ سَقَرَ ﴿١٨﴾
49. Wax kasta waxaan ku abuuray qadar. ﴿١٩﴾ إِنَّا كُلَّ شَيْءٍ خَلَقْنَاهُ بِقَدَرٍ ﴿١٩﴾
50. Amarkannaguna ma aha mid mooyeen sida Ilbidhiqsi. ﴿٢٠﴾ وَمَا أَمْرُنَا إِلَّا وَجِدَةٌ كَلَمْحٍ بِالْبَصَرِ ﴿٢٠﴾
51. Dhab ahaan baan u halaagnay kuwa idin la mid ah, ee wax waantoobi ma jiraa. ﴿٢١﴾ وَلَقَدْ أَهْلَكْنَا أَشْيَاعَكُمْ فَهَلْ مِنْ مُدْكِرٍ ﴿٢١﴾
52. Wax kastoo dadku falo wuxuu ku suganyahay Kutubta. ﴿٢٢﴾ وَكُلَّ شَيْءٍ فَعَلُوهُ فِي الرَّبْرِ ﴿٢٢﴾
53. Wax kastoo yar ama waynna waa qoran yahay. ﴿٢٣﴾ وَكُلُّ صَغِيرٍ وَكَبِيرٍ مُنْتَظَرٌ ﴿٢٣﴾
54. Kuwa dhawrsadana waxay gali Jannooyin iyo wabiyaal. ﴿٢٤﴾ إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي جَنَّاتٍ وَنَهْرٍ ﴿٢٤﴾
55. Meel la fadhiisto oo xaq ah oo Eebaha awoodda leh agtiisa ah (yaa u sugnaatay). ﴿٢٥﴾ فِي مَقْعَدٍ صِدْقٍ عِنْدَ مَلِكٍ مُّقْتَدِرٍ ﴿٢٥﴾

Gaaladii reer Makaad iyo xaq diidayaashuba kama wanaagsana Gaaladii hore ee la halaagay, Ruux iyaga ka mid ah oo xumaan la'aan Eebe u ballanqaadayna ma jiro, xoog ku faanna qiimo ma leh, immisaa jabtay cid is bidaysay tiro iyo tayaba, xusuuso Maalintii Badar ee Muslimiinta iyo Gaaladu kulmeen iyo Maalmihii ka dambeeyayba, waxayna ku tusin xaqnimada quraanka iyo siduu Eebe ballankiisii u oofiyay, waxaase Gaalo jab Adduun u sii dheer caddibaadda Qiyaame iyo Naarta Saqara. Eebeheenna wax walbaba qadar buu ku ahaysiyay, wax ku culusna ma jiro, wax walbana Kitaab-buu ku yaallaa, kuwa dhawrsadana wuxuu ku abaalmarin Janno iyo sharaf, iyo meel la fadhiisto meesha u

fiican, Waxaa laga wariyay Cabdullaahi binu Cumar in Rasuulkii Eebe yidhi (Ammaan iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) (Ummad la arko waxay leedahay Majuusi, Majuusiga Ummaddaydu waa kuwa dhihi Qadar ma jiro, Hadday bukoodaan ha booqannina, hadday dhintaanna ha u tagina). waxaa wariyay Imaam Axmad Binu xambal.

Hadalkii Nabiga ee saxiixa ahaana waa: (Eebe kaalmayso hana cajisin, haddii wax kugu dhaco dheh waa qadar Alle wuxuu doonayna wuu falay, Hadhihin haddaan fali lahaa sidaas waxay noqon lahayd sidaas, qoomammo waxay furtaa fal shaydaan). Al-Qamar (43-55).



Suurat Ar-Raxmaan



Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Eebaha) Raxmaan ah.
2. Wuxuu baray (Nabiga iyo dadka kalaba) Quraanka.
3. Dadkana wuu abuuray.
4. Wuxuuna baray dadka (Hadalka).
5. Qorraxda iyo dayaxuna waxay ku soodaan xisaab.
6. Xiddigga iyo Geedkuba way Sujuudaan (Eebe Dartiis).
7. Samadana Eebaa koryeelay, Garsoorna wuu dajiyay.
8. Si aydaan uga gudbin Caddaaladda.
9. Miisaanka ku hagaajiya Caddaalad, hana nusqaaminnina.
10. Dhulkana Eebe wuxuu u dajiyay khalqiga.
11. Dhexdiisa waxaa ah Faakihad (khudaar) iyo Timir Fiido leh.
12. Xubuubna (midho) bal leh iyo udgoonna wuu abuuray.
13. Nicmooyinka Eebe tebaad beeni-naysaan (Insi iyo Jinniyow).
14. Dadka Eebaa ka abuuray dhoobo Jilay oo kale ah.
15. Jaankana wuxuu ka abuuray oolka Naarta.

الرَّحْمَنُ ①

عَلَّمَ الْقُرْآنَ ②

خَلَقَ الْإِنْسَانَ ③

عَلَّمَهُ الْبَيَانَ ④

الْقَمَرَ مُحْسَبًا ⑤

وَالنَّجْمِ وَالشَّجَرِ يَسْجُدَانِ ⑥

وَالسَّمَاءَ رَفَعَهَا وَوَضَعَ الْمِيزَانَ ⑦

أَلَّا تَطْغَوْا فِي الْمِيزَانِ ⑧

وَأَقِيمُوا الْوَزْنَ بِالْقِسْطِ وَلَا تُخْسِرُوا الْمِيزَانَ ⑨

وَالْأَرْضَ وَضَعَهَا لِلْأَنَامِ ⑩

فِيهَا فَلَاحِكَةٌ وَالنَّخْلُ ذَاتُ الْأَكْمَامِ ⑪

وَالْحَبُّ ذُو الْعَصْفِ وَالرَّيْحَانُ ⑫

فِي آيَةِ الْآءِ رَبِّكُمْ أَكْثَرُ بَيَانَ ⑬

خَلَقَ الْإِنْسَانَ مِنْ صَلْصَلٍ كَالْفَخَّارِ ⑭

وَخَلَقَ الْجَانَّ مِنْ مَّارِجٍ مِنْ نَارٍ ⑮

16. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ الْآءِ رَبِّكُمْ أَنْتُمْ كَذِبَانٌ ﴿١٦﴾

Eebe wuxuu ku billaabay Magaciisa Raxmaan ah, iyo Nicmooyin badan oos ugu nicmeeyay khalqigiisa, sida Quraanka uu baray Addoommadiisa, Abuuridda, hadalka, Qorraxda, Dayaxa, Xiddigaha, Geedaha, Cirka, Dhulka iyo Caddaaladda uu soo dajiyay, Saas daraaddeed yuu ku soo celceliyay Suuraddan u digidda beeninta Nicmooyinkiisa.

Jaabir waxaa laga wariyay Eebe ha ka raalli noqdee inuu yidhi: Waxaa u Soo baxay Rasuulkii Eebe Ammaan iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee Asaxaabtii, wuxuuna ku akhriyay Suuratu-Raxmaan billawgeeda ilaa dhammaadkeeda, markaasay aammuseen wuxuuna yidhi: (Waxaan ku akhriyay Suuraddan Jinniga Habeenkii Jinniga, iyagaana idinka fiicnaa Raddinta (Jawaab), markastoon imaaddo hadalka Eebe Sarreeye: (Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan) waxay dhahaan: Mid Nicmadaada ka mid ahna Eebahannow beenin mayno, Adaana mahad iska leh). waxaa wariyay Tirmidi. Ar-Raxmaan (1-16).

17. Ilaaheen waa Eebaha Labada Qorrax ka soo bax iyo Labada Qorrax u dhac.

رَبُّ الْمَشْرِقَيْنِ وَرَبُّ الْمَغْرِبَيْنِ ﴿١٧﴾

18. Nicmooyinka Eeba teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ الْآءِ رَبِّكُمْ أَنْتُمْ كَذِبَانِ ﴿١٨﴾

19. Eebe waan kan Labada Baddood dariseeyey iyagoo kulmi.

مَرَجَ الْبَحْرَيْنِ يَلْتَقِيَانِ ﴿١٩﴾

20. Dhexdoodana yeelay soohdin (kala reebta) iskumana xadgudbaan.

بَيْنَهُمَا بَرْزَخٌ لَا يَبْغِيَانِ ﴿٢٠﴾

21. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ الْآءِ رَبِّكُمْ أَنْتُمْ كَذِبَانِ ﴿٢١﴾

22. Waxaa lagala baxaa Baddaas Lu'Lu' iyo Murjaan (Jawhar).

يَخْرُجُ مِنْهُمَا اللُّؤْلُؤُ وَالْمَرْجَانُ ﴿٢٢﴾

23. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ الْآءِ رَبِّكُمْ أَنْتُمْ كَذِبَانِ ﴿٢٣﴾

24. Eebe waxaa u sugnaaday Doomaha socda Badda oo Buuro la mid ah.

وَاله الْجِبَالُ الْمُنشآتُ فِي الْبَحْرِ كَالْأَعْلَامِ ﴿٢٤﴾

25. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ الْآءِ رَبِّكُمْ أَنْتُمْ كَذِبَانِ ﴿٢٥﴾

26. Dhammaan waxa (Dhulka) korkiisa ah wuu tagi.

كُلٌّ مِنْ عَلَيْهَا فَأَنٍ ﴿٢٦﴾

27. Waxaase hadhi Eebaha wayn ee sharafta leh.

وَيَبْقَى وَجْهَ رَبِّكَ ذُو الْجَلَالِ وَالْإِكْرَامِ ﴿٢٧﴾

28. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ الْآءِ رَبِّكُمْ أَنْتُمْ كَذِبَانِ ﴿٢٨﴾

Qorraxdu halkay ka soo muuqato, ama ku qarsoonto, badaha aan isku khaldamaynin Jowharta lagala soo baxo, Doomuhuna dhex sabbeeyaan iyo khalqiga intiisa kalaba Eebaa iska leh, isagaana maamula, wax kasta oo Dhulka ku dul-noolna wuu tagi oo dhiman, wax Eeba ka soo hadhay oo joogi ama baaqi ahaanna ma jiro, saa darteed, waa in la hormarsadaa camal wax tara maalinta aan Naf kale wax taraynin in Eebe doono mooyeen. Ar-Raxmaan (17-28).

29. Waxaa Eebe wax waydiista Samada iyo Dhulka waxa ku sugan, goorwalba-na wuxuu maamuli arrin.

يَسْتَعْلَهُ مَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ كُلُّ يَوْمٍ هُوَ فِي شَأْنٍ ﴿٢٩﴾

30. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيَهُمُ الْآتَاءُ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٠﴾

31. Waana idin xisaabin si dhab ah Insi iyo Jinniyow.

سَتَفْرَعُ كُفْرًا إِنَّهُ التَّقْلَانِ ﴿٣١﴾

32. Nimcooyinka Eebana teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيَهُمُ الْآتَاءُ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٢﴾

33. Jinni iyo Insiyow haddaad kartaan inaad ka baxdaan Samada Jahooyinkooda iyo Dhulka ka baxa, kamana bixi kartaan xujo la'aan.

يَمْعَشِرَ الْجِنَّ وَالْإِنْسِ إِنْ أَسْطَعْتُمْ أَنْ تَتَفَدُوا مِنْ أَقْطَارِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ فَانْفَدُوا لَا تَتَفَدُونَ إِلَّا بِسُلْطَانٍ ﴿٣٣﴾

34. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيَهُمُ الْآتَاءُ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٤﴾

35. Eebe (hadduu doono) wuxuu idinku diri Olol Naar ah, iyo Maar (la dhalaaliyay) umana gargaarsanaysaan.

يُرْسِلُ عَلَيْكُمْ شَوَاطِيرَ مِنْ نَارٍ وَخُمُوسًا فَلَا تُنصِرُونَ ﴿٣٥﴾

36. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيَهُمُ الْآتَاءُ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٦﴾

37. Markay Samadu dillaacdo oy noqoto ubax guduudan oo subag la mid ah (dhalaasho) markaas dadkaa la abaalmarin).

فَإِذَا انشَقَّتِ السَّمَاءُ فَكَانَتْ وَرْدَةً كَالدِّهَانِ ﴿٣٧﴾

38. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيَهُمُ الْآتَاءُ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٨﴾

39. Maalintaas Ruux la warsan dambiigiisa Insi iyo Jinniba ma jiro.

فَيَوْمَئِذٍ لَا يُسْتَعْتَبُ عَنْ رَبِّهِمْ إِسْسٌ وَلَا جَنْ ﴿٣٩﴾

40. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيَهُمُ الْآتَاءُ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٠﴾

Cidwalba way u baahantahay Ilaaheed, cir iyo Dhul iyo meel kastaba ha joogtee, Eebana isagaa goor walba maamula khalqigiisa, isagaana xisaabin Qiyaamada, wax awood ah ama xoog ah oo ilaahay

lagaga hortagaana ma jiro, iyo wax ka carari kara midna, xumaanlowgana wuxuu ku abaal-marin xumaan, wax gargaara ahna ma helo maalinta xisaabta iyo qiyaamaha, Eebana wax kama qarsoona cidna wax ma warsado maalinta abaal-marinta. Ar-Raxmaan (29-40).

41. Dambiiyayaasha waxaa lagu aqoonsan astaamahooda, waxaana la qaban Foodda iyo gommadaha (Naartaana lagu tuuri).

يَعْرِفُ الْمَجْرُمُونَ بِسِيمَاهُمْ فَيُؤْخَذُ بِالتَّوَصَّى
وَالْأَقْدَامِ ﴿٤١﴾

42. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ آلَاءَ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٢﴾

43. Tani waa Jahannamadii ay beeniyeen Dambiiyayaashu (yaa lagu dhihi).

هَذِهِ جَهَنَّمُ الَّتِي يُكَذِّبُ بِهَا الْمَجْرُمُونَ ﴿٤٣﴾

44. Waxay ku meereysan Jahannamo iyo biyo kulayl daran dhexdooda.

يَطْوُونَ لَهَا مِنْ تَحْتِهَا آيَاتٍ خَمِيرًا إِنْ ﴿٤٤﴾

45. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ آلَاءَ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٥﴾

46. Ruuxii ka yaaba Eebe hor istaaggii-sa wuxuu mudan Laba Janno.

وَلَمْ يَخَافْ مَقَامَ رَبِّهِمْ جَنَّاتٍ ﴿٤٦﴾

47. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ آلَاءَ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٧﴾

48. Jannooyinkaas oo midabyo leh (iyo Laamo).

ذَوَاتًا أَقْنَانِ ﴿٤٨﴾

49. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ آلَاءَ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٩﴾

50. Waxaa laga helaa ilo socda.

فِيهِمَا عَيْنَاتَانِ جَوَّيْرَانِ ﴿٥٠﴾

51. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ آلَاءَ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥١﴾

52. Waxaa laga helaa nooc kasta oo Faakiha ah (Khudaar ah).

فِيهِمَا مِنْ كُلِّ فَاكِهَةٍ رَوْحَانَ ﴿٥٢﴾

53. Nimcooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ آلَاءَ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٣﴾

Sama falaha iyo xumaan faluhu iskuma qasna Eeba agtiisa, waxaana dambiihaha lagu aqoonsan calaamooyinkiisa, ciqaab iyo Naarta Jahannama oo lagu tuurana wuu la kulmi, taasoo uu dhexmeereysan, lamana dulmiyin ee isagaa xaqa beeniya, Ruuxiise ka yaaba Eebe la kulankiisa iyo xisaabtiisa waxaa lagu abaalmarin Janno wanaag ku dhan yahay, Nimcooyinka Eebeheen waa in lagu mahad naqo khayrkana loogu kaalmaysto. Ar-Raxmaan (41-53).

54. Waxay ku dangiigsan (ehlu Jannuhu) Gogol ay tahay hoosteedu istabraq (xariir) Midhaha, Jannooyinku waa u dhawyihiin.

مُكَيِّبِينَ عَلَى فُرُشٍ بَطَّأَتْهَا مَاءٌ إِسْتَبْرَقٌ
وَحَيْثُ الْجَنَّتَيْنِ دَانٍ ﴿٥٤﴾

55. Nicmooyinka Eebe Teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٥﴾

56. Jannooyinka iyo Firaashka waxaa ku sugan Haween Indha waawayn oo dhawrsoon oosan taabannin horay Insi iyo Jinni midna.

فِيهِنَّ قَصَصَرْتُ الْأَعْرَابَ لَتَبْطِئَنَّ بِهِنَّ إِسْ قَبْلَهُمْ
وَلَأَجَانُّ ﴿٥٦﴾

57. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٧﴾

58. Waxaad mooddaa Haweenkaas Yaaqut iyo Murjaan (Jawhar midab leh).

كَأَنَّهُنَّ الْيَاقُوتُ وَالْمَرْجَانُ ﴿٥٨﴾

59. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٩﴾

60. Wanaag abaalkiisu soo wanaag ma aha.

هَلْ جَزَاءُ الْإِحْسَنِ إِلَّا الْإِحْسَنُ ﴿٦٠﴾

61. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦١﴾

Adduunku waa Guri shaqo, Aakhirana waa Guriga abaal-marinta, Suuraddanna wax badan yuu Ilaaheen kaga warramay jannada iyo tilmaameheeda, iyo wanaaggeeda, iyo in ehlu Jannuhu ku noolaan khayr iyo Nicmo, iyo wax kasta oo wanaag ah. Eebaana ku abaal mariyay Nicmadaas, maxaa yeelay wanaag abaalkiisu waa wanaag.

Anas Binu Maalik waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulka Eebe yaa akhriyay Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: (Wanaag Abaalkiisu sow wanaag ma aha) wuxuuna yidhi: «Ma ogtihiin wuxuu Eebihiiin yidhi?» waxay dheheen: Eebe iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yidhi: «wuxuu leeyahay Ruuxaan ugu Nicmeeyay Eebe aqoonsi abaalkiisu waa Janno». waxaa shegay Bagawi. Ar-Raxmaan (54-61).

62. Waxay heli Labadaas Janno ka sokow kuwa kale.

وَمِنْ دُونِهِمَا جَنَّتَانِ ﴿٦٢﴾

63. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٣﴾

64. Waana Laba Jannoo madow (cagaaran).

مُدْهَمَّتَانِ ﴿٦٤﴾

65. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فَيَأْتِيءُ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٥﴾

66. Waxaa dhexdeeda ah Laba ilood oo burqan.

فِيهِمَا عَيْنَانِ نَضَّاخَتَانِ ﴿٦٦﴾

67. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ آءِ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذَّبَانِ ﴿٦٧﴾

68. Dhexdooda waxaa ah Faakihad (khudrad) iyo Timir iyo Rummaan.

فِيهِمَا فَكَّهُةٌ وَنُحْلٌ وَرُومَانٌ ﴿٦٨﴾

69. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ آءِ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذَّبَانِ ﴿٦٩﴾

70. Dhexdooda waxaa ah Haween khayr leh oo Quruxsan.

فِيهِنَّ حَيْرَاتٌ حِسَانٌ ﴿٧٠﴾

71. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ آءِ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذَّبَانِ ﴿٧١﴾

72. Waa Haween Indhacad oo Guri-gooda jooga.

حُورٌ مَّقْصُورَاتٌ فِي الْخِيَامِ ﴿٧٢﴾

73. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ آءِ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذَّبَانِ ﴿٧٣﴾

74. Waa Haween uusan horay u taabannin Insi iyo Jinni midna.

لَمْ يَطْعَمْنَ إِسْنًا قَبْلَهُمْ وَلَا جِآنًا ﴿٧٤﴾

75. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ آءِ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذَّبَانِ ﴿٧٥﴾

76. Waxayna ehlu-Jannuhu ku dangiigan Barkimo cagaaran iyo Gogol Quruxsan.

مَتَكِينٍ عَلَى رُقْفٍ خَضِرٍ وَعَبَقَرِي حِسَانِ ﴿٧٦﴾

77. Nicmooyinka Eebe teebaad beeni-naysaan.

فِي آيَةِ آءِ الْآءِ رَبِّكُمَا تُكَذَّبَانِ ﴿٧٧﴾

78. Waxaa barakadiisu badnaatay Magaca Eebaha wayn ee shrafta leh.

تَبَرَّكَ أَشْرُؤُ رَبِّكَ ذِي الْجَلَالِ وَالْإِكْرَامِ ﴿٧٨﴾

Saasoo kale waxay Aayadahani ka qisoon Jannada iyo ehelkeeda iyo waxa wanaag ah ee Eebe ku dhammeeyay, waxayna Suuraddu ku soo uruursatay markay wax badan soo Celcelisay Nicmada Ilaahay iyo inaan la beenninin waynida Ilaaheen iyo sharaftiisa, waxaana waajib ah in si dhab ah loo qaddariyo loona caabudo, maxaa yeelay waa Ilaaha Adduunkiyo Aakhiraba, Ee mu'miniinta u naxariista, Dambiila-yaashana ka aarsada.

Waxaa la waydiiyaya Xasanul Basri-hadalka Eebe Sarreeye (Gogol quruxsan) Wuxuuna Yidhi: Waa Gogosha ehlu-Jannaha ee Aabihiin waayee doona. Ar-Raxmaan (62-78).

Suurat Al-Waaqicah

سُورَةُ الْوَاقِعَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Markay Qiyaamadu dhacdo.

إِذَا وَقَعَتِ الْوَاقِعَةُ ①

2. Dhiciddaas wax beenin ma jiro (markay arkaan).

لَيْسَ لَوْعَتِهَا كَأَذِيَّةٍ ②

3. Waana (mid) hoos u dhiga kor u dhiga ah.

خَافِضَةٌ رَافِعَةٌ ③

4. Marka la gilgilo Dhulka gilgilid.

إِذَا رَجَّتِ الْأَرْضُ رَجًا ④

5. Buurahana la ridqo.

وَوَسَّتِ الْجِبَالُ بَسًا ⑤

6. Oy noqoto boodh Firdhisana.

فَكَانَتْ هَبَاءً مُتَّبِنًا ⑥

7. Ood ahaataan Saddex nooc, (markaasaa dadka la soo bixin).

وَكثِيرٌ أَرْوَاهُ الْغُلَّةُ ⑦

8. Kuwa midigta mari (waa Ehlu-Jannehee), ma taqaan kuwa midigta mari.

فَأَصْحَابُ الْمَيْمَنَةِ مَا أَصْحَابُ الْمَشْأَمَةِ ⑧

9. Iyo kuwa bidixda mari (waa ehlu Naarkee) ma taqaan kuwa Bidixda mari.

وَأَصْحَابُ الْمَشْأَمَةِ مَا أَصْحَابُ الْمَيْمَنَةِ ⑨

10. Iyo kuwii aad u hormaray.

وَالسَّاعِقُونَ السَّاعِقُونَ ⑩

11. Waa kuwa Eebe dhaweeyay.

أُولَئِكَ الْمَفْرُوقُونَ ⑪

12. Waxayna gali Jannooyin Nicma leh.

فِي جَنَّاتِ النَّعِيمِ ⑫

13. Waana Koox ka mid ah kuwii hore.

ثَلَاثَةٌ مِنَ الْأُولَى ⑬

14. Iyo wax yar oo ka mid ah kuwii dambeeyay.

وَقَلِيلٌ مِنَ الْآخِرِينَ ⑭

15. Sariiro Dahab laga sameeyay yayna ku sugnaan.

عَلَى سُرُرٍ مَوْصُوفَةٍ ⑮

16. Oy kuna dangiigan korkeeda iya-goo is qaabili.

مُسْتَكْبِرِينَ عَلَيْهَا مُتَقَلِّبِينَ ⑯

Maalinta Qiyaame waa magacyo badantahay, waynideeda iyo dhibkeeda darteed, dhab-ahaanbayna u iman markaasay cid walba rumayn, maxayse tari rumayni waqtigaas, waxaana dhaca Maalintaas dad kor loo qaado oo la sharrifo iyo mid hoos loo dhigo oo la dulleeyo, dadkuna wuxuu noqon Saddex Qaybood, kuwa aad u hormaray iyo kuwo Kitaabkooda Midigta ka qaadan, iyo kuwo xun oo Jidka Jahannama Qaadi, saas darteed yey waajib tahay inuu u darbado Ruux walba Maalintaas, kana fiirsado Kooxduu noqon isagoo eeba ku xidhan.

Cusmaan Binu Suraaqa wuxuu sheegay: In Saacadda Qiyaame hoos Ugu dhigi Naarta Cadowga Eebe, Jannaduna kor ugu qaadi Awliyadiisa. Al-Waaqicah (1-16).

17. Waxaa la dhex wareegi wiilal waari.

يَطُوفُ عَلَيْهِمْ وِلْدَانٌ مُّخَلَّدُونَ ﴿١٧﴾

18. Koobab iyo kildhiyo iyo weel uu ka buuxo macaan socda.

يَا كُؤَابٍ وَأَبَارِقٍ وَكُؤَابِينَ مَعِينٍ ﴿١٨﴾

19. Madax xanuun iyo caqlitagid midna ma leh.

لَا يَصْدَحُونَ عَنْهَا وَلَا يَزِفُونَ ﴿١٩﴾

20. Faakihaday «khudaartay» doonnaanna way heli.

وَفَكَهْمَةٍ مِّمَّا يَتَخَبَّرُونَ ﴿٢٠﴾

21. Iyo Hilib Shimbir oo kay rabaan ah.

وَلَحْمٍ طَيْرٍ مِّمَّا يَنْسَجُونَ ﴿٢١﴾

22. Iyo Haween Janno oo Leh Indha cadcad iyo wayninba Isku darsaday.

وَحُورٍ عِينٍ ﴿٢٢﴾

23. Ood mooddo Jawhar la ilaaliyay.

كَأَمْثَلِ اللُّؤْلُؤِ الْمَكْنُونِ ﴿٢٣﴾

24. Waana abaalmarin waxay Camalfali jireen (oo wanaag ahaa).

جَزَاءً لِّمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٢٤﴾

25. Kumana maqlaan Jannada hadal micno darra iyo dambi midna.

لَا يَسْمَعُونَ فِيهَا الْقَوْلَ وَلَا تَأْتِيهِمْ ﴿٢٥﴾

26. Waxayse ku Maqli Salaan (dhexdooda ah).

إِلَّا قِيلًا سَلَامًا سَلَامًا ﴿٢٦﴾

Waxaa wanaag iyo Janno ah waxaa Eebe u darbay Koox ka mid ah ehlu-Jannaha oo ah kuwo ku hormaray wanaagga iyo khayrka, waxayna muujin Arrintaasu inayan darajada Jannadu isku mid ahayn, inkastoy mid waliba ku filantahay ehelkeeda. Nicmada Aakhiro iyo cabbitaankeedu midna xanuun iyo madax xanuun ma leh.

Ibnu-Cabbaas waxaa laga wariyay inuu yidhi: Khamrada (Adduunka) afar arrimoodbay leedahay «Waalli, Madax xanuun, Mantag iyo Kaadi». Al-Waaqicah (17-26).

27. Kuwa Midigta mari, Ma taqaan kuwa midigta.

وَأَصْحَابِ الْيَمِينِ مَا أَصْحَابِ الْيَمِينِ ﴿٢٧﴾

28. Waxay heli Geedka Sidriga ah oon Qodax lahayn.

فِي سِدْرٍ مِّنْضُودٍ ﴿٢٨﴾

29. Iyo Geedka Dhalxiga ah oo buuxa.

وَطَلْحٍ مِّنْضُودٍ ﴿٢٩﴾

30. Iyo Hoos joogta ah. وَطَلِّ مَمْدُودٍ ﴿٢٠﴾
31. Iyo Biyo socda (goor walba). وَمَاءٍ مَسْكُوبٍ ﴿٢١﴾
32. Iyo Faakiha badan. وَفَلَاحَةٍ كَأَسْرَفٍ ﴿٢٢﴾
33. Oon la goynaynin lana reebaynin. لَا مَقْطُوعٍ عَلَيْهِ وَلَا مَمْنُوعَةٍ ﴿٢٣﴾
34. Iyo Gogol la koryeelay. وَفُورٍ مَرْفُوعَةٍ ﴿٢٤﴾
35. Annagaa ahaysiin (Da'yarayn Ha-weenka Jannada). إِنَّا أَنشَأْنَاهُنَّ إِنشَاءً ﴿٢٥﴾
36. Kana dhigi kuwa aan la taaban. فَجَعَلْنَهُنَّ أَكْبَارًا ﴿٢٦﴾
37. Oy is jecelyihiin (Raggooda) siman-
na. عُرُبًا أَتْرَابًا ﴿٢٧﴾
38. Kuwa Midigta yaa muta (arrintaas). لِأَصْحَابِ الْيَمِينِ ﴿٢٨﴾
39. Waana Koox kuwii hore-ka mid ah. ثُلَّةً مِّنَ الْأُولَىٰ ﴿٢٩﴾
40. Iyo Koox kuwa dambe ka mid ah. وِثْلَةٌ مِّنَ الْآخِرِينَ ﴿٣٠﴾

Kuwa Midigta mari oo Jannada aadi, ama Kitaabkooda Midigta laga siin waa Kooxda Labaad ee Suuraddani ka warrami, waxaana ka horreeyay saabiqiintii, siduuna Eebe khayr badan iyo Janno ugu abaal-marin kuwii hormaray yuu ugu yaboohay wanaag kuwii Midigtana, maxaa yeelay khayrka iyo Naxariista Eebe waa badantahay wuxuuna ku shubaa cidduu doono, Camal wanaagsan iyo shaqase Waa lagama maarmaan Ruuxii Caqli leh Al-Waaqicah (27-40).

41. Kuwa Bidixda mari, ma taqaan kuwa Bidixda. وَأَصْحَابِ الشِّمَالِ مَا أَصْحَابِ الشِّمَالِ ﴿٣١﴾
42. Waxay ku sugnaan Naar daran iyo Biyo kulayl badan. فِي سَمُورٍ وَجَمِيمٍ ﴿٣٢﴾
43. Iyo hoos madow oo wax guba. وَطَلِّينَ يَتَخُمَّوْنَ ﴿٣٣﴾
44. Aan qaboobayn aragna fiicnayn. لَأَبْأَرِدُ وَلَا أُكْرِيمُ ﴿٣٤﴾
45. Waxay ahaayeen arrintaas ka hor kuwo ku raaxaysta (Xumaanta). إِنَّهُمْ كَانُوا أَقْبَلَ ذَلِكَ مُتْرَفِينَ ﴿٣٥﴾
46. Waxayna Daa'imi jireen dambi wayn. وَكَانُوا يُبْصِرُونَ عَلَىٰ الْحَنَتِ الْعَظِيمِ ﴿٣٦﴾
47. Waxayna dhihi jireen ma markaan dhimanoo oon Lafo iyo Carro noqon-naa lana soo bixin. وَكَانُوا يُسْأَلُونَ أَيَّذَا مَشَتْ وَكَانُوا تَرَابًا وَعِظْمًا
إِنَّا لَمَسْغُوتُونَ ﴿٣٧﴾
48. Ama Aabayaalkannagii horreeyay. أَوَّابًا وَأَرْبَابًا الْأَوَّلُونَ ﴿٣٨﴾

49. Waxaad dhahdaa kuwii horreeyay iyo kuwii dambeeyayba.

قُلْ إِنَّ الْأَوَّلِينَ وَالْآخِرِينَ ﴿٤٩﴾

50. Waxaa loo soo kulmin Maalin la yaqaan (Qiyaamo).

لَمَجْمُوعُونَ إِلَىٰ مِيقَاتِ يَوْمٍ مَّعْلُومٍ ﴿٥٠﴾

51. Markaas Baadiyaalyahow Beeniyaash ah.

ثُمَّ لَنُرَكِّبُنَّهَا الصَّالُونَ الْمَكِيدُونَ ﴿٥١﴾

52. Waxaad wax ka cunaysaan Geed xun.

لَا يَكُونُ مِنْ شَجَرٍ مِنْ زُفْرٍ ﴿٥٢﴾

53. Aad kana buuxinaysaan Caloosha.

فَمَا لَوْ أَنَّ مِنَ الْبَطُونَ ﴿٥٣﴾

54. Waxaadna ku cabbaysaan Biyo kulayl badan.

فَشَرِبُونَ عَلَيْهِ مِنَ الْحَمِيرِ ﴿٥٤﴾

55. Waxaadna u cabbaysaan sida Geel aad u oomman.

فَشَرِبُونَ سُورَ الْعِهْرِ ﴿٥٥﴾

56. Kaasina waa waxa lagu soori (Gaalada) Maalinta abaalmarinta (Qiyamada).

هَذَا زُرَّتْ لَهُمْ ذِكْرَ الَّذِينَ ﴿٥٦﴾

Kuwanna waa Qaybtii Saddexaad ee Suuraddu sheegtay, Labadii horana waxay ahaayeen ehlu Janno, kuwan Bidixda marayna waxay noqdeen ehlu-Naar. Eebana cidna ma dulmiyo, hase yeeshee wuxuu ka abaal-mariyaa camalkiisa uun maxaa yeelay xumaan badane, xad-gudba, soobixinta beeniyaad oo Jidka xun raacay la mid ma aha sama fale, Eebe addeece iyo Jid wanaagsan qaade. Ibnu-Cabbaas wuxuu yidhi: Dambiga wayni waa Gaalnimo, Mujaahid iyo Cikrima-na saasaa laga sheegay. Al-Waaqicah (41-56).

57. (Eebe wuxuu yidhi) Annagaa idin abuurraye maxaad la rumaynwaydeen (soo bixinta).

لَخُنُّ حَلَقْتَكُمْ فَلَوْلَا تُصَدِّقُونَ ﴿٥٧﴾

58. Ka warrama Dhibicda aad tuuraysaan «Manida».

أَفَرَأَيْتُمْ مَا تَصْنَعُونَ ﴿٥٨﴾

59. Ma idinkaa abuurra mase Annagaa abuurra.

ءَأَنْتُمْ تَخْلُقُونَهُ وَأَمْ لَخُنُّ الْخَالِقُونَ ﴿٥٩﴾

60. Annagaa idinku eheynay Geerida, Ruux naga fakanna ma jiro.

لَخُنُّ قَدَرًا بَدَيْتُمْ كَالْمَوْتِ وَمَا تَعْنُ مَسْبُوقِينَ ﴿٦٠﴾

61. Inaan idinku baddallo kuwo idin la mid ah oon idinka ahaysiinno waxaydaan aqoon.

عَلَىٰ أَنْ يُبَدَّلَ أَمْثَلَكُمْ وَنُنشِئَكُمْ فِي مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٦١﴾

62. Dhab ahaan baad u ogtihiin abuuriddii hore, ee maad wax xusuusataan.

وَلَقَدْ عَلِمْتُمُ النَّشْأَةَ الْأُولَىٰ فَلَوْلَا تَتَذَكَّرُونَ ﴿٦٢﴾

63. Ka warrama waxaad beereysaan.

أَفَرَأَيْتُمْ مَا تَحْرُثُونَ ﴿٦٣﴾

64. Ma idinkaa soo dhaliya mase Annagaa soo dhalinna.

ءَأَنْتُمْ تَزْرَعُونَهُ وَأَنْتُمْ لَا تَزْرَعُونَ ﴿٦٤﴾

65. Haddaan doonno waxaan ka dhi-gaynaa burbur (aan wax tarin) markaa-saad yaabaysaan (murugoonaysaan).

لَوْ نَشَاءُ لَجَعَلْنَاهُ حُطَامًا فَظَلْتُمْ تَفَكَّهُوتَ ﴿٦٥﴾

66. (Idinkoo dhihi) Waa nala khasaariyay.

إِنَّا الْمَغْرُوبُونَ ﴿٦٦﴾

67. Mase waa nala hoojiyay.

بَلْ لَحْنٌ مِّنْهُمْ وَمُونَ ﴿٦٧﴾

68. Ka warrama Biyahaad cabbaysaan.

أَفَرَأَيْتُمُ الْمَاءَ الَّذِي تَشْرَبُونَ ﴿٦٨﴾

69. Ma idinkaa ka soo dajiyay Daruurta mase annakaa soo dajinnay.

ءَأَنْتُمْ أَنْزَلْتُمُوهُ مِنَ الْمُزْنِ أَمْ نَحْنُ الْمُنزِلُونَ ﴿٦٩﴾

70. Haddaan doonno waxaan ka yee-laynaa khadhaadh (aan la hollin karin) ee maad ku mahadisaan (Eebe).

لَوْ نَشَاءُ جَعَلْنَاهُ أُجَاجًا فَلَوْلَا تَشْكُرُونَ ﴿٧٠﴾

71. Ka warrama Dabkaad Madagta ka shiddaan.

أَفَرَأَيْتُمُ النَّارَ الَّتِي تُورُونَ ﴿٧١﴾

72. Ma idinkaa ahaysiiyay Geedkeeda mase annagaa ahaysiinnay.

ءَأَنْتُمْ أَنْشَأْتُمْ شَجَرَتَهَا أَمْ نَحْنُ الْمُنشِئُونَ ﴿٧٢﴾

73. Annagaa ka dhigany Dabka waano iyo nacfiga kuwa Safarka ah (iyo cidlada).

نَحْنُ جَعَلْنَاهَا تَذَكُّرًا وَوَعْتًا لِّلْمُقِيمِينَ ﴿٧٣﴾

74. Ee waynee oo u Tasbiixso Magaca Eebaha wayn.

فَسَبِّحْ بِاسْمِ رَبِّكَ الْعَظِيمِ ﴿٧٤﴾

Aayadahan waxay ka warrami awoodda Eebe iyo Nicmooyinkiisa uu Dadka ugu Nicmeeyay, sida abuuridda Cunnada uu Dhulka ka soo bixiyo, Biyaha macaan oos Cirka inooga keeno iyo Geedaha uu Dabka ku Abuuray si looga shito iyo khayrkiisa kale ee badanba, Hadal iyo dhammaanna Eebe mahad, ammaan iyo Addeccid buu mutaa si loogu liibaano naxariistiisa waasaca ah.

Waxaa la wariyay in Muslimiintu Saddex wadaagaan: Dabka, Daaqa iyo Biyaha» Waxaa wariyay Axmad iyo Abuu-Daawuud. Al-Waaqicah (57-74).

75. (Eebe wuxuu yidhi) Waxaan ku dhaartay halkay Xiddiguhu ku dhacaan (ku qarsoomaan).

* فَلَا أَقْسِمُ بِمَوْقِعِ الشُّجُورِ ﴿٧٥﴾

76. Waana dhaar wayn haddaad ogti-hiine.

وَإِنَّهُ لَقَسَمٌ لَّا تَعْلَمُونَ عَظِيمٍ ﴿٧٦﴾

77. Quraanku waa shay sharaf leh. إِنَّهُ لَقُرْآنٌ كَرِيمٌ ﴿٧٧﴾
78. Wuxuuna ku suganyahay Kitaab la dhawray. فِي كِتَابٍ مَكْنُونٍ ﴿٧٨﴾
79. Mana taabto Ruuxaan Daahir ahayn. لَا يَمَسُّهُ إِلَّا الْمُطَهَّرُونَ ﴿٧٩﴾
80. Waxaana soo dajiyay Eebaha Caalamka. تَنْزِيلٌ مِنْ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٨٠﴾
81. Ee ma Quraankan yaad beeninaysaan. أَفِي هَذَا الْحَدِيثِ أَنْتُمْ مُدْهُونَ ﴿٨١﴾
82. Ood ka yeeleysaan (mahaddii) Risqigiinna beenin (Xaqa). وَيَجْعَلُونَ رِزْقَكُمْ أَنَّكُمْ تُكَذِّبُونَ ﴿٨٢﴾
83. Maxaydaan markay Naftu dhuunta gaadho. فَقَوْلًا إِذَا بَلَغَتِ الْحُقُوفَ ﴿٨٣﴾
84. Idinkuna aad fiirinaysaan (Ruuxa dhiman). وَأَنْتُمْ حِينِيذٍ تَنْظُرُونَ ﴿٨٤﴾
85. Annaguna aan idiinka dhawnahay, Laakiinse aydaan arkaynin. وَتَحْقُقِ آقْرَبَ إِلَيْهِ مِنْكُمْ وَلَكِنْ لَا تَسْمِعُونَ ﴿٨٥﴾
86. Haddaad tihiin kuwa aan la soo bixinaynin. فَقَوْلًا إِنْ كُنْتُمْ غَيْرَ مَدِينِينَ ﴿٨٦﴾
87. Maad Nafta ku celisaan, haddaad Run sheegaysaan. تَرْجِعُونَهَا إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٨٧﴾
88. Hadduu ka mid yahay (Ruuxa dhiman) kuwa Eebe dhaweeyay. فَأَمَّا إِنْ كَانَ مِنَ الْمُقْرَبِينَ ﴿٨٨﴾
89. Wuxuu heli naxariis iyo farax iyo-Jannada Naciima. فَرَوْحٌ وَرَيْحَانٌ وَجَنَّتْ نَعِيمٌ ﴿٨٩﴾
90. Hadduu yahay kuwa Midigta marina. وَأَمَّا إِنْ كَانَ مِنَ أَصْحَابِ الْيَمِينِ ﴿٩٠﴾
91. Nabadgalyaa u sugnaatay (iyo wanaag). فَسَلَّمَ لَكَ مِنْ أَصْحَابِ الْيَمِينِ ﴿٩١﴾
92. Hadduu yahay kuwa xaqa beeniyay ee dhumayna. وَأَمَّا إِنْ كَانَ مِنَ الْمُكْفُرِينَ الصَّالِينَ ﴿٩٢﴾
93. Wuxuu heli martiqaad kulayl badan. فَنَزَّلُ مِنْ جَعِيمٍ ﴿٩٣﴾
94. Iyo galidda Naarta Jaxiimo. وَتَصْلِيَةً جَعِيمٍ ﴿٩٤﴾

95. Waxaas (la soo sheegay) waa run dhab ah.

إِنَّ هَذَا لَهُوَ حَقُّ الْيَقِينِ ﴿٩٥﴾

96. Ee u tasbiixso Magaca Eebaha wayn.

فَسَبِّحْ بِاسْمِ رَبِّكَ الْعَظِيمِ ﴿٩٦﴾

Eebe wuxuu ku dhaartay Xiddigaha iyo halkay ku qarsoomaan, waana dhaarwayne in Quraanku sharaf leeyahay, dhawrsoonna yahay, Ruuxaan nadiif ahayna u habboonayn inuu taabto, xagga Eebana ka soo dagay, wax la beeniyo iyo wax la dafirana uusan ahayn, Eebahaas wayn ee awoodda leh isagaa wax dila wuxuu doonana wax baajin kara ma jiro, Dadkuna siday Suuraddu horayba u sheegtay waa saddex qaybood, Laba ehlu Janna ah oo liibaanay iyo mid khasaaray.

Cuqba Binu Caamir Wuxuu yidhi: Markay ku soo dagtay Rasuulka Eebe Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee (U tasbiixso magaca Eebahaaga wayn) wuxuu yidhi: «Yeela Rukuucdiinna», markay soo dagtay: (U tasbiixso magaca Rabbigaaga sare) Wuxuu yidhi Rasuulkii Eebe «Yeela Sujuudiinna» Waxaa wariyay Axmad, Abuudaawud iyo Ibnu-Maajah. Bukhaarina wuxuu ka wariyay Abii-Hurayre inuu yidhi, Rasuulkii Eebe wuxuu yidhi: «Laba Kalimo oo Carrabka ku fudud miisaankana ku culus Eebaha Raxmaanahna Jecelyahay waa: Eebaa Ceeb ka dheer, mahadna leh, waxaa Ceeb ka dheer Eebaha wayn». Al-Waaqicah (75-96).



Suurat Al-Xadiid



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee naxariis guud iyo mid Gaaraba naxariista.

1. Waxaa Eebe sharrifa (oo wayneeya) waxa ku sugan Samaawaadka iyo Dhulka, Eebana waa adkaade falsan.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١﴾

2. Waxaa Eebe u sugnaaday xukunka samaawaadka iyo Dhulka. isagaa wax nooleeya waxna dila, waxwalbana wuu karaa.

لَهُ مَلَكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ نَجِيءٌ وَيُعْتَبَرُ
وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢﴾

3. Allaah waa kan Horreeyey, (wax ka horreeyana ayan jirin) waa kan dambayn (oo wax ka dambayni jirin) waa kan daahira (oo wax ka Sarreeyaa jirin) waa kan baadina (oo wax ka dhawi jirin), wax walbana og.

هُوَ الْأَوَّلُ وَالْآخِرُ وَالظَّاهِرُ وَالْبَاطِنُ
وَهُوَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٣﴾

4. Eebe waa kan ku abuuray Samaawaadka iyo Dhulka Lix Maalmood qaddarkood, markaasna Carshiga ka sara maray, wuxuuna ogyahay waxa dhulka gali iyo waxa ka soo bixi, waxa Samada ka soo dagi iyo waxa u kori, Eebana waa idinla joogaa meelkastood ku sugantihinba^(*), waxaad cama falaaysaanna Eeba waa arkaa.

هُوَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ
أَسْتَوَىٰ عَلَى الْعَرْشِ يَعْلَمُ مَا يَلِيهِ فِي الْأَرْضِ وَمَا يَخْرُجُ
مِنْهَا وَمَا يَنْزِلُ مِنَ السَّمَاءِ وَمَا يَرْجَعُ فِيهَا وَهُوَ مَعَكُمْ أَيْنَ
مَأْكُنتُمْ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٤﴾

5. Eebaa iska leh xukunka Samada iyo dhulka, xaggiisaana loo celin ummuuraha.

لَهُ مَلَكُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ قَالِيَ اللَّهُ تَرْجَعُ الْأُمُورُ ﴿٥﴾

6. Eebe waa kan habeenka iyo dharaarta is dhex galiya (kala badiya) waxa laabta ku jirana waa ogyahay.

يُولِجُ اللَّيْلَ فِي النَّهَارِ وَيُؤَلِّجُ النَّهَارَ فِي اللَّيْلِ وَهُوَ عَلِيمٌ
بِدَاتِ الصُّدُورِ ﴿٦﴾

jiro, wax ka qarsoonna ma jiro, tasarrufkana isagaa iska leh, haddaad adugu arkinna isagaa ku arka, Rasuulkii Eebana Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa has yeelee wuxuu yidhi: «Iimaan waxaa ugu fiican inaad ogaato in Eebe kula joogo sidaad tahayba». Al-Xadiid (1-6).

(*) La joogid ogaal iyo awood iyo kaalmo iyo ka warqab Sida ay ku Fasireen culumadii asaxaabta iyo intii wanaag ku raacday mana aha Ilaahbaa naftiisii ku dhexjira meel kasta, waana ka hufanyahay sidaas, ee Alle waa ka sarreeyaa khalqigiisa. (dib u eegaha).

7. Rumeeya Eebe iyo Rasuulkiisa, bixiyana waxa ka mid ah wuxuu idiinka dhigay wakiillo (maamulkiisa) kuwa rumeeyay Eebe oo idinka mid ah waxna bixiyay waxay Mudan ajir wayn.

ءَامِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَأَنْفِقُوا مِمَّا جَعَلَكُمْ
مُسْتَحْلِفِينَ فِيهِ قَالِ الَّذِينَ ءَامِنُوا مِنْكُمْ وَأَنْفِقُوا
لَهُمْ أَجْرًا كَبِيرًا ﴿٧﴾

8. Maxaad leedihiin ood la rumayn waydeen Eebe, isagoo Rasuulkuna idiinku yeedhi inaad rumaysaan Eebihiin, isagoo Eebe ballan idinka qaaday haddaad mu'miniin tihiin.

وَمَا لَكُمْ لَأَنْتُمْ نُونَ بِاللَّهِ وَالرَّسُولِ يَدْعُوكُمْ لِتُؤْمِنُوا
بِرَبِّكُمْ وَقَدْ أَخَذَ مِيثَاقَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ ﴿٨﴾

9. Eebe waa kan soo dajiyay Ayaad cadcad si uu idiinka bixiyo mugdiga, Nuurna idiinku bixiyo,, Eebana waa idiin naxariis badanyahay.

هُوَ الَّذِي يُزِيلُ عَلَى عَبْدِهِ ءَايَاتٍ يَبْلُغُ لِيُخْرِجَكُمْ مِنْ
الظُّلُمَاتِ إِلَى النُّورِ وَإِنَّ اللَّهَ بِكُمْ لَعَوِّفٌ رَجِيمٌ ﴿٩﴾

10. Maxaad leedihiin ood wax ugu bixinwaydeen Jidka Eebe isagoo Samaawaadka iyo Dhulka dhaxalkooda isla leeyahay, masinna Ruux wax bixiyay Maka furashadeedii ka hor oo Jahaaday, kuwaasaa ka Ajri wayn kuwii bixiyay oo dagaa lamay ka dib, dhammaantoodna Eebe wuxuu u ya-boohay wanaag, Eebana waa ogyahay waxaad camal falaysaan.

وَمَا لَكُمْ أَلَّا تُنْفِقُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلِلَّهِ مِيرَاثُ السَّمَوَاتِ
وَالْأَرْضِ لَا يَسْتَوِي مِنْكُمْ مَنْ أَنْفَقَ مِنْ قَبْلِ الْفَتْحِ
وَقَاتِلٌ أَوْلَيْكَ أَعْظَمُ دَرَجَةً مِنَ الَّذِينَ أَنْفَقُوا مِنْ بَعْدُ
وَقَاتِلُوا وَكَلَّا وَعَدَّ اللَّهُ الْحُسْنَىٰ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ
خَبِيرٌ ﴿١٠﴾

11. Waa kuma kan Eebe amaah wanaagsan amaahin (wax bixin) oo markaas uu u laablaabo, Ajri wanaagsanna hela.

مَنْ ذَا الَّذِي يُقْرِضُ اللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا فَيُضْعِفُهُ لَهُ
وَلَهُ وَءَجْرًا كَبِيرٌ ﴿١١﴾

Rumaynta xaqa iyo daa'imkiisuba waa waajib, saasoo kale Jidka Eebe oo wax lugu bixiyo iyo Jahaadkuba iyana waa wajib, maxaay eelay Cirka, Dhulka iyo waxa ku suganba oy xooluhu ka mid yihiin Eebaa iska leh, ee dadka waxaa loo siiyay inay wanaag ku falaan, xumaantana ka reebaan. Cabdullaahi binu Shakhiir waxaa laga wariyay inuu yidhi: waxaan u imid Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee isagoo leh: «waxaa idin shuqliyay wax badsasho, Ibnu aadam wuxuu dhihi: Xoolahaygii, oo miyaad ku leedahay xoolahaaga waxaad cunto ood dhammaysato, ama aad xidhato oo Duugayso, ama aad sadaqaysato ood hormar Sato mooyee? wixii intaas ka soo hadhay waad ka tagi ood u dhaafi Dad». waxaa wariyay Muslim iyo Imaamu Axmad.

Markaas waa inaan xaqa rumaynaa waxna bixinnaa illeen Rasuulkii iyo Quraanka yaa wanaag inoogu yeedhiye, wax bixinta iyo Jahaadka iyo camalkuna isku mid ma aha, ee waa kala tagsanyihiin marka la eego waqiga iyo dhibaataada, inkastoo guud ahaan ay wanaag tahay/saas daraadeed yaa looga baahan yahay Ruuxa mu'minka ah: rumayn xaqa, wax bixin, Jahaad iyo camal fiican oo wax tara Labada Daaroodba. Al-Xadiid (7-11).

12. (Xusuusta) Maalinta aad arki Mu'miniinta Rag iyo Haweenba iyagoo nuurkoodu socdo hortooda iyo Midigtooda, waxaana lagu dhihi bishaaraysta Maanta, waa Jannooyin Ay dureeri dhexdooda Wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda, taasina waa liibaan wayn.

يَوْمَ تَرَى الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ يَسْعَىٰ نُورُهُمْ بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَبِأَيْمَانِهِمْ بِشَرِّ كَلِمٍ أَلْفُ يَوْمٍ حَزَّتْ فَتَجْرَىٰ مِنْ حَتْمِهَا الْأَنْهَارُ خَلِيلِينَ فِيهَا ذَٰلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿١٢﴾

13. Waa Maalinta Munaafiqiintu Rag iyo Haweenba ay ku dhihi kuwa xaqa rumeeyay na suga aan ka Dhuxul qaadanno Nuurkiinnee, waxaana lagu dhihi ku noqda gadaashiinna, waydiistana Nuur, markaasaa layeelaa dhexdooda Darbi xaggiisa gudahana Naxariis tahay, xaggiisa dibaddana Caddibaad tahay.

يَوْمَ يَقُولُ الْمُنَافِقُونَ وَالْمُنَافِقَاتُ لِلَّذِينَ آمَنُوا انظُرُوا نَارَ نَفْتِسِمْ مِنْ نُورِكُمْ قِيلَ أَرْجِعُوا وَرَاءَكُمْ فَالْتَمِسُوا نُورًا فَضُرِبَ بَيْنَهُم بِسُورٍ لَهُ بَابٌ بَاطِنُهُ فِيهِ الرَّحْمَةُ وَظَاهِرُهُ مِنْ قِبَلِهِ الْعَذَابُ ﴿١٣﴾

14. Way u dhawaaqi Mu'muniinta iyagoo leh miyaannaan idinla jirin, Mu'miniintuna waxay ku dhihi haa (waad nala jirteen) laakiin waxaad balayseen Naftiinna, xumaanna waad la sugteen (Nabiga Iyo Mu'miniinta), waadna shakideen waxaana idinku kadiisay yididiilo (been ah) Inta amarka Eebe ka yimaaddo (Geerida) waxaana Eebe idinku kadiisay Kadiye (Shaydaan).

يُنَادُوا وَهُمْ أَلَمْ يَكُن مَعَكُمْ قَالُوا بَلَىٰ وَلَكِنَّكُمْ فَتَنْتُمْ أَنْفُسَكُمْ وَتَرْتَضَوْنَ مَا زَبَدْتُمْ وَعَرْتُمْ الْأَمَانِي حَتَّىٰ جَاءَ أَمْرُ اللَّهِ وَعَرَّكُمْ بِاللَّهِ الْعُرُورُ ﴿١٤﴾

15. Maanta (Qiyaamada) laydin kama aqbalo is furasho idinka iyo kuwa Gaalobay midna, Hoygiinnuna waa Naar waadna mudataan, meel loo hoydana iyadaa u xun.

فَالْيَوْمَ لَا يُوَفِّدُكُمْ فِدْيَةً وَلَا مِنَ الَّذِينَ كَفَرُوا مَا وَلَكُمْ النَّارُ هِيَ مَوْلَاكُمْ وَبِئْسَ الْمَصِيرُ ﴿١٥﴾

Maalintaa waxaa la arki Mu'miniinta Rag iyo Haweenba oo Nuur hor socdo looguna bishaarayan wanaag. Munaafiqiintuse waa ka duwantahay, waxayna la kulmi murug iyo xumaan, waxayna ka codsan Mu'miniinta inay sugaan Nuurkana wax ka siiyaan, hasa yeeshee Daarta Aakhiro Nuur lagama qaato, waxaase lagu kasbadaa Adduunka, Ruuxse baloobay, oo xaqa shakiyay, oo Yididiila been ah iyo Shaydaan ku kadiisay intuu ka dhinto miyaa xoolo isku furasho iyo calaacal wax u tari Maalinta Qiyaame.

Ibnu-Cabbaas waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulkii Eebe wuxuu yidhi Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Eeba sarreeye wuxuu Dadka ugu yeedhaa Maalinta Qiyaame magacyadooda isagoo asturi Addoomadiisa, markase Jidka (Siraad) la joogo Eebe sarreeye wuxuu siin Ruux kastoo Mu'min ah iyo Ruux kastoo Munaafiq ahba Nuur, markay Jidka marayaan Yaa Eebe ka qaadaa Nuurka Munaafiq, markaasay dhahaan Munaafiqiintu: nasuga aan Nuurkiinna ka dhuxulqaadannee, Mu'miniintuna waxay dhihi: Eebahannow noo taam yeel Nuurkannaga, Markaasaan Ruuxna Ruux kale Xusuusanaynin». Waxaa wariyay Dhabaraani. Al-Xadiid (12-15).

16. Miyayan u dhawaanin kuwa xaqa rumeeyay inay u khushuucdo quluubtoodu xusidda Eebe (Quraanka) iyo waxa xaqa ah ee dagi, oyna la mid noqonin kuwii Kitaabka la siiyay horay (Yahuud iyo Nasaaro) oo muddadu ku dheeraatay, markaas ay ingagtay Quluubtoodu, wax badan oo ka mid ahna waa Faasiqiin (ka baxay Xerada).

﴿الَّذِينَ آمَنُوا أَنْ تَحْشَعُ قُلُوبُهُمْ
لِيَكْرِهَ اللَّهُ وَمَاتَرَلَّ مِنَ الْحَقِّ وَلَا يَكُونُوا كَالَّذِينَ
أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلُ فَطَالَ عَلَيْهِمُ الْأَمَدُ فَقَسَتْ قُلُوبُهُمْ
وَكَثِيرٌ مِنْهُمْ فَاسِقُونَ ﴿١٦﴾

17. Ogaada in Eebe nooleeyo Dhulka dhimasho ka dib, wuuna idiin caddeeyay Aayaadka si aad wax u kastaan.

﴿اعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَحْيِي الْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا قَدْ بَيَّنَّا الْآيَاتِ
لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿١٧﴾

18. Ragga wax Sadaqaysta iyo Haweenka wax Sadaqaysta oo Eebana Amaah wanaagsan Amaahiya (waa Sadaqada) waa loo laablaabi, waxayna leeyhiin Ajri sharaf leh.

﴿إِنَّ الْمَصْدِقِينَ وَالْمَصْدِقَاتِ وَأَقْرَبُوا اللَّهَ قَرَابًا
حَسَنًا يُضَاعَفُ لَهُمْ وَلَهُمْ أَجْرٌ كَرِيمٌ ﴿١٨﴾

19. Kuwa rumeeyay Eebe iyo Rasuulkiisa kuwaasu waa Runbadanayaal, Shuhadaduna Eebe agtiisa ajri iyo Nuur bay ku mudan kuwase Gaaloobay beeniyayna Aayaadkannaga kuwaasi waa ehelka Naarta Jaxiimo.

﴿وَالَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ أُولَئِكَ هُمُ الصَّادِقُونَ
وَالشَّهَادَةُ عِنْدَ رَبِّهِمْ لَهُمْ أَجْرُهُمْ وَنُورُهُمْ وَالَّذِينَ
كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا أُولَئِكَ أَصْحَابُ
الْجَحِيمِ ﴿١٩﴾

Ma habboona in Ruuxa Mu'minka ah waqtigu la dheeraado, Qalbigiisuna halmaamo xusidda Eebe iyo Quraakiisa, waxaase habboon innu Eebe ku xidhnaado oosan la mid noqonin Gaalada Qalbigoodu ingagay ee Faasiqiinta ah, isagoo xusuusan Nicmooyinka Eebe waxna bixin si uu uga helo Eebe agtiisa ajri wayn, dhabtuna Waxay tahay kuwa Eebe rumeeya iyo Rasuulkiisa inay yihiin runlow-yaal, Shahiidka xaqa ku dhintayna isagoo Gaalada la Jahaadi xuquuq-diisana difaac, wuxuu ka mudan Eebe agtiisa Sharaf, Ajri, iyo Nuur.

Gaalase iyo kuwa beeniya xaqaba waxay mudan Naarta Jaxiima.

Bukhaari iyo Muslim waxaa ku sugnaaday: «Shuhadada Arwaaxdoodu waxay ku sugantahay Shimbir cagaaran oo Jannada ka daaqa meeshey doonto cunaheed. Al-Xadiid (16-19).

20. Ogaada in nolosha Adduunyadu tahay ciyaar iyo dheeldheel iyo isqurxin iyo isufaan dhaxdiinna ah iyo badsi

﴿اعْلَمُوا أَنَّمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا لَعِبٌ وَلَهُمْ وَرِيسَتُهُ
وَتَفَاخُرٌ بَيْنَكُمْ وَتَكَاثُرٌ فِي الْأَمْوَالِ وَالْأَوْلَادِ كَمَثَلِ

Xoolo iyo Carruur, sida Roob isjeclay-siiyey beertaha wuxuu soo bixiyo, markaasna ingaga ood arki isaga oo doorsoomay noqonna burbur; Aakhirana waxaa jira caddibaad daran iyo dambidhaaf xagga Eebe ka iman iyo raali ahaansho, nolosha Adduunyana waa raaxo lugu kadsoomi.

عَيْنَ الْعَجَبِ الْكُفَّارِ بِنَاتِهِمْ يَهْمُحُ فَتَرَاهُ مُصَفَّرًا
ثُمَّ يَكُونُ حَطْمًا فِي الْأَخْرَجِ عَذَابٌ سَدِيدٌ وَمَغْفِرَةٌ
مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانٌ وَمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا إِلَّا مَتَاعٌ
الْعُرُورِ ﴿٤٦﴾

21. U rotama Dambidhaafka Eebe iyo Janno balladhkeedu yahay balladhka Samada iyo dhulka oo kale, loona darbaya kuwa rumeeyay Eebe iyo Rasuulkiisa, Arrintaasuna waa samafal Eebana wuxuu siin Ruuxuu doono, Eebana Fadligiisu waa wayn yahay.

سَابِقُوا إِلَىٰ مَغْفِرَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا كَعَرْضِ
السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ أُعِدَّتْ لِلَّذِينَ ءَامَنُوا بِاللَّهِ
وَرُسُلِهِ ذَٰلِكَ فَضْلُ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَاءُ
وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ الْعَظِيمِ ﴿٤٧﴾

22. Wixii dhib ah oo Dhulka ka dhaca ama naftiinna ku dhaca wuxuu ku sugnaaday Kitaab Abuuriddiisa ka hor, arrintaasuna waa u fuddudahay Eebe.

مَا أَصَابَ مِنْ مُصِيبَةٍ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي
الْفِئْتِمِ إِلَّا فِي كِتَابٍ مِّن قَبْلِ أَن نَّزَّلَهَا
إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى اللَّهِ يَسِيرٌ ﴿٤٨﴾

23. Si aydaan ugu murugoonin wixii idinka taga aydaan uguna farxin wuxuu idin siiyo, Eebe ma jecla Ruux kasta oo isla wayn oo faanbadan.

لَيْسَ لَكَ تَأْسَرُ عَلَىٰ مَا فَاتَكَ مَكْرَهُ وَلَا تَفْرَحُ
بِمَعَاذِنِكَ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ كُلَّ مُخْتَالٍ فَخُورٍ ﴿٤٩﴾

24. Oo ah kuwa bakhayli dadkana fari bakhaylnimo, Ruuxii jeedsadana Eebe waa ka hodon mahadsan.

الَّذِينَ يَبْتَخُلُونَ وَيَأْمُرُونَ النَّاسَ بِالْبِخْلِ وَمَن
يَتَوَلَّ فَإِنَّ اللَّهَ هُوَ الْعَنِيُّ الْحَمِيدُ ﴿٥٠﴾

Adduun iyo Akharaba Eebaa abuuray iskana leh, waana in Adduunka la camalfalaa si Aakhara loo nicmoobo, hasa yeeshee waa inaan Adduunka uun loo go'in, illeen dhab-ahaantii wuxuu la mid yahay dhul waraabay oo doog quruxsan kas oo dhashay, mudda ka dibna dabayshu marto oo ingaga kalana burbura, waxaabase intaa u sii dheer inay tahay Ciyaar iyo dhalanteed ayan habboonayn in lagu kadsoomo.

Rasuulkuna wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeclee: «Ul meel la dhigto oo Jannada ah yaa ka khayrroon Addunyada iyo waxa ku sugan, akhriya: (nolosha Adduunyo ma aha waxaan raaxo lagu kadsoomo ahayn). waxaa Wariyey Ibnu-Jariir, wuxuuna ku suganyahay Saxiix. Saas daraadeed waa in la ogaado in Eebe agtiisa wanaag iyo awoodiba taallo, wixii Shar ahna loo adkaysto, Khayrkana aan lala boodboodin.

Cikrima wuxuu yidhi: «Ruxaan farxaynin ama murugoonaynin ma jiro, ee faraxa mahad ka dhiga murugtana sabir». Al-Xadiid (20-24).

25. Dhab ahaan baan ula dirray Rasuulladannadii xujooyin, waxaana u

لَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا بِالْبَيِّنَاتِ وَأَنزَلْنَا مَعَهُمُ

soo dajinnay Kutub iyo Caddaalad, si dadku ugu tooso Caddaalad, waxaana soo dajinnay birta iyadoo Shiddo ku dheehantahay iyo nacfi dadka iyo in Eebe muujiyo Cidda u gargaari isaga (Diinta) iyo Rasuulladiisa iyagoon arkaynin, Eebana waa Xoog badane Adkaade ah.

الْكِتَابَ وَالْمِيزَانَ لِيَقُومَ النَّاسُ بِالْقِسْطِ
وَأَنْزَلْنَا الْحَدِيدَ فِيهِ بَأْسٌ شَدِيدٌ وَمَنْعَفَةٌ لِلنَّاسِ
وَلِيَعْلَمَ اللَّهُ مِنْ بَصُرِهِ، وَرُسُلَهُ، بِالْعَلِيِّ إِنَّ اللَّهَ
قَوِيٌّ عَزِيزٌ ﴿٤٥﴾

26. Dhab ahaan baan u dirray (nabi) Nuux iyo (nabi) Ibraahim, waxaana yeellay faracooda Nabinnimo iyo Kitaabbo loo soo dajiyay, waxaana ka mid ah kuwa hanuunay, waxbadan oo ka mid ahna waa Faasiqiin.

وَلَقَدْ أَنْزَلْنَا نُوحًا وَإِبْرَاهِيمَ وَجَعَلْنَا فِي ذُرِّيَّتِهِمَا
النُّبُوَّةَ وَالْكِتَابَ فَمِنْهُمْ مُهْتَدٍ وَكَثِيرٌ
مِنْهُمْ فَاسِقُونَ ﴿٤٦﴾

27. Markaasaan raacinnay Raadkoodii Rasuulladanadii, waxaana raacinnay Ciise Binu maryama, waxaana siinnay Injiil, waxaana yeellay Quluubta kuwii raacay isudanqasho iyo naxariis iyo Ruhbaaniyad (Adduun ka jeedsa) ay iyagu billawdeen oonaan ku faral yee- lin, doonidda raalli ahaanshaha Eebe dartiis yayna u faleen, mase ayna ilaalinin ilaalin xaq ah, waxaana siinnay kuwii rumeeyay oo ka mid ah ajrigoodii, wax badan oo ka mid ahna waa faasiqiin.

ثُمَّ قَفَّيْنَا عَلَى آدَامَ وَنُوحٍ وَابْرَاهِيمَ بِبُرْسُلَانَا وَقَفَّيْنَا بِعِيسَى ابْنِ
مَرْيَمَ وَآتَيْنَاهُ الْإِنْجِيلَ وَجَعَلْنَا فِي قُلُوبِ الَّذِينَ
اتَّبَعُوهُ رَأْفَةً وَرَحْمَةً وَرَهَابِنَاءَ اتَّبَعُواهَا
مَا كَتَبْنَا عَلَيْهِنَّ إِلَّا ابْتِغَاءَ رِضْوَانِ اللَّهِ
فَمَنْ عَرَفَهَا حَقَّ رَعَانِيهَا فَآتَيْنَا الَّذِينَ آمَنُوا
مِنْهَا أَجْرَهُمْ وَكَثِيرٌ مِنْهُمْ فَاسِقُونَ ﴿٤٧﴾

28. Kuwa xaqa rumeeyow Eeba ka dhawrsada, rumeeyana Rasuulkiisa haydin siiyo laab laab naxariiseede, hana idiin yeelo Nuur aad ku socotaane, hana idiin dambidhaafee, Eebana waa dambidhaafe naxariista ah.

يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَآمِنُوا بِرُسُلِهِ
يُؤْتِكُمْ كِفْلَيْنِ مِنْ رَحْمَتِهِ وَيَجْعَلْ لَكُمْ نُورًا
تَمْشُونَ بِهِ وَيَغْفِرْ لَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٤٨﴾

29. Inay ogaadaan ehlu kitaabku inayan karin inay hantaan Fadliga Eebe, fadliga Eebana awooddiisu uu ku jiraa, wuxuuna siin Ruuxuu doono, Eebana waa kan Fadliga wayn leh.

لَيْلًا يَعْلَمُ أَهْلَ الْكِتَابِ الْأَلْبَقْدَرُونَ عَلَىٰ حَقِّهِ مِنْ
قَبْلِ اللَّهِ وَأَنَّ الْفَضْلَ بِيَدِ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَنْ يَشَاءُ
وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ الْعَظِيمِ ﴿٤٩﴾

soo dirayna sida Nuux iyo Ibraahiim faracyadoodii yuu raaciyay, siduu Ciisaba Injiil u Siiyay, kuwii raacay ee xaqa ku toosnaana naxariis dhexdooda u yeelay hasa yeeshee ay isku adkeeyeen, waxyaalo cusubna la yimaadeen, xaqiina ayna dhawrin, badankooduna Faasiqiin noqday.

Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelec) «Nabi kasta wuxuu leeyahay Ruhbaaniyo Ruhbaaniyadda Ummadanna waa Jahaad Jidka Eebe waynaay». waxaa wariyay Ibnu Abii Xaatim.

Saas daraadeed waa in Eebe laga yaabaa, Rasuulkiisana la raacaa, si uu inoo siiyo Ajri laab-laaban, Nuur ina hoggaamiya, dambi-dhaaf iyo Naxariis, lana ogaado inaan Gaalo Samafalka Eebe ku tasarrufaynin ee Eebe uun Awood leeyahay, Ciddu doonana Khayr kuu ku shubaa. Al-Xadiid (25-29).



Suurat Al-Mujaadalah



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu maqlay Haweenaydii hadalkeeda Nabiga kula doodayay xaalkii ninkeeda, oo Eebe u sheeganaysay «dhibaataadeeda», Eebana wuu maqlayey doodooda, maxaa yeelay Ilaahay waa ka wax walba maqla arka.

2. Kuwa haweenkooda kala mid dhiga hooyadood oo kale haweenkoodu ma aha hooyadood, hooyo waa midda wax dhashay, kuwaasina waxay ku hadlayaan hadal xun iyo been, Ilaahayna waa Saamax badane Dhaafid badane.

3. Kuwa haweenkooda kala mid dhigi hooyadood haddana ku noqon «haweenkii» waxaa ku waajib ah qoor xoraynteed intayan istaaban, Arrintaasi waa waano, Ilaahayna waxa dadku camal fali waa ogyahay.

4. Ruuxaan helin qoor uu xoreeyo wuxuu soomi Laba Bilood oo israacsan intayan istaaban, ciddiise aan karin soonka wuxuu quudin Lixdan miskiin, arrintu waa saas si aad Eebe u rumaysaan iyo Rasuulkiisa, taasina waa xuduuddii Ilaahay Gaalase waxaa u sugnaaday Cadaab kulul.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

فَدَسْمَعِ اللَّهُ قَوْلَ الَّذِي يُجَادِلُكَ فِي زَوْجِهَا وَتَشْكِي
إِلَى اللَّهِ وَاللَّهُ يَسْمَعُ تَحَاوُرَكُمَا إِنَّ اللَّهَ
سَمِيعٌ بَصِيرٌ ﴿١﴾

الَّذِينَ يَظْهَرُونَ مُنْكَرًا مِنْكُمْ فِي نِسَائِهِمْ مَاهُنَّ أُمَّهَاتُهُمْ
إِنَّ أُمَّهَاتُهُمْ إِلَّا اللَّائِي وَلَدْنَهُمْ وَإِنَّهُنَّ لَيَكْفُرُونَ
بِكُمْ وَإِنَّ اللَّهَ لَآخِفٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿٢﴾

وَالَّذِينَ يَظْهَرُونَ مِنْ نِسَائِهِمْ ثُمَّ يَعُودُونَ لِمَا قَالُوا
فَكَرْهُوا رِقَبَةً مِنْ قَبْلِ أَنْ يَتَمَاسَا ذَلِكَ نُورُ عَطْوَانِ
بِهِ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٣﴾

فَمَنْ لَمْ يُجِدْ قَصِيَامًا مِنْهُنَّ مَتَابِعِينَ مِنْ قَبْلِ
أَنْ يَتَمَاسَا فَمَنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَاذْعَارًا سِتْرِينَ مَسْكِينًا
ذَلِكَ لِتُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَذَلِكَ حُدُودُ اللَّهِ
وَاللَّكُوفِينَ عَذَابُ اللَّهِ الْعَلِيمِ ﴿٤﴾

Aayadahanu waxay ku soo degeen haweenay la dhihi jiray Khawlo iyo ninkeedii Aws binu Saamit oo ku yidhi: waxaad igala mid tahay hooyaday oo kale, markaasay Nabiga (naxariis iyo Nabad gelyo korkiisa Eebe ha yeelee) u timid iyadoo sheegan inay caruur badan leedahay ay doonaysana in ninkeedii lagu celiyo, saasna ay Nabiga hadalka isku celceliyen.

Ilaahay waa maqlaa waana ajiibaa ducada qofka dhibban sida haweenaydaas quraanku ku soo degay. Dhaartaas la soo sheegay waa mid Jaahiliintii ku dhaaran jireen Muslimintana way ka reebban tahay waxaana ka waajibi Kafaara Gud. Caa'isha waxay tidhi: Mahad Eebaa iska leh wax walbana maqla,

waxaa timid Haweenyaadas doodaysay Anoo Guriga dhinac ka mid ah jooga. hadalkeeda qaarna aanan maqleyn markaasaa Eebe soo dajiiyey aayadda. Waxaa wariyey Bukhaari. Al-Mujaadalah (1-4).

5. Kuwa Eebe iyo Rasuulkiisa khilaa-faya Waa la dulleeyey sidii loo dulleeyay kuwii ka horreeyey, Eebana wuxuu soo dajiiyey Aayado cad cad Gaalana waxaa u sugnaaday cadaab wax ihaaneeya.

إِنَّ الَّذِينَ يُحَادِّثُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ لِكَيْتُمُوكَا كَيْتِ
الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَقَدْ أَنْزَلْنَا آيَاتِنَا بَيِّنَاتٍ
وَالْكَافِرِينَ عَذَابٌ مُهِينٌ ﴿٥﴾

6. Maalin buuna ihaanayn Ilaahay uu soo bixin dhammaantood, uguna war-rami waxay camal faleen, Eebana waa kooby iyana waa hilmaameen, Ilaahayna wax kasta wuu daalacan (arkaa).

يَوْمَ يَبْعَهُمُ اللَّهُ جَمِيعًا فَيُنَبِّئُهُمْ بِمَا عَمِلُوا أَحْصَاهُ
اللَّهُ وَسَوَاءٌ وَاللَّهِ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴿٦﴾

7. Ma ogtahay in Ilaahay ogyahay Cirka iyo Dhulka waxa ku jira, Sed-dexdii faqiba Ilaahay baa afreeya, Shantana Ilaahay baa Lixeeya; waxa ka yar iyo waxa ka badanba Ilaahaybaa la jooga meeshay ahaadaanba, wuxuuna uga warrami waxay camal faleen Maalinta Qiyaamo Ilaahayna wax wal-ba waa ogyahay.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ
مَا يَكُونُ مِنْ نَجْوَى ثَلَاثَةٍ إِلَّا هُوَ رَابِعُهُمْ وَلَا خَمْسَةٍ
إِلَّا هُوَ سَادِسُهُمْ وَلَا آذَنٌ مِنْ ذَلِكَ وَلَا أَسْرَارٌ إِلَّا هُوَ
مَعَهُمْ أَيْنَ مَا كَانُوا ثُمَّ يَنبِئُهُمْ بِمَا عَمِلُوا يَوْمَ الْقِيَامَةِ
إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٧﴾

8. Miyaadan ogayn kuwa laga reebay faqa xun oo haddana ku noqon waxa laga reebay, kuna faqi dambi iyo cadawnimo iyo caasinnimada Rasuulka, markay Nabiga u yimaadaanna ku salaamaya waxaan Eebe ku salaamin oo hoos u dhihi maa Eebe nagu cadaabo waxaan ku hadlayno waxaa ku filan Jahannamo oo ay galayaan waana Guri xun.

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ هُمْ أَعْرَضُوا عَنْ التَّوْحِيدِ ثُمَّ رَعُدُوا وَلِمْ لِمَا هُمْ
عِنْدَهُ وَيَتَذَكَّرُونَ بِالْأَلِيمِ وَالْعَدُونَ وَمَعْصِيَتِ الرَّسُولِ
وَلِإِذْ جَاءَهُمْ حَبْرٌ بِمَا لَمْ يَحْتَكِبْ بِهِ اللَّهُ وَيَقُولُونَ فِي
أَنْفُسِهِمْ لَوْلَا يُعَذِّبُنَا اللَّهُ بِمَا نَقُولُ حَسْبُكُمْ جَهَنَّمُ
بِصَلَاتِهَا فَيَقْسُ الْمَصِيرُ ﴿٨﴾

9. Kuwa rumeeyayow markaad faqay-saan ha ku faqina dambi, colnimo iyo caasinnimada Rasuulka ee ku faqa wanaag dhawrsani, Eebana ka yaaba isagaa la isu soo kulmine.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذَا تَنَجَّسُوا فَلَا تَنَجَّسُوا بِالْإِيمَانِ
وَالْعَدْوَانِ وَمَعْصِيَتِ الرَّسُولِ وَتَنَجَّسُوا بِالزَّبْرِ
وَالنَّفَقَى وَأَتَقُوا اللَّهَ الَّذِي إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٩﴾

10. Faqa xun Shaydaan buu ka yimaad-da suu u walbahaar geliyo kuwa xaqa rumeeyay, waxbase kama dhibo idan

إِنَّمَا التَّوْحِيدَ مِنَ الشَّعْطَانِ لِيَحْزُنَ الَّذِينَ ءَامَنُوا
وَلَيْسَ بِضَارٍّ لَهُمْ شَيْئًا إِلَّا إِيذَانُ اللَّهِ وَعَلَى اللَّهِ

Ilaahay Mooyee, Ilaahay uun ha tala saarteen kuwa xaqa rumeeyey.

فَلْيَسِّرْ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٧﴾

Eebe iyo Rasuulkiisa ciddii la colloowda halaag baa u dambayn iyo cadaab daran, maxaa yeelay Eebe wax walba waa ogyahay, waana in wanaag lagu faqo een xumaan iyo colnimo lagu faqin, maxaa yeelay ruux kasta Eebeheen waa la joogaa waana daalacan, isagaana loo noqon, cid kastana wuxuu ka abaal marin waxay kasbatay Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) hadday idin Salaamaan Ehelu Kitaabka (Gaaladu) dhaha korkiinna ha ahaato (waa saxiix).
Al-Mujaadalah (5-10).

11. Kuwa xaqa rumeeyayow haddii la idin dhaho isu waasiciya fadhiga; isu-waasiciya Ilaahay wanaagga ha idiin waasiciyee, marka la idin yiraahdo Jihaadka iyo Khayrka u degdegana; u degdega Ilaahay wuu koryeelayaa kuwa xaqa rumeeya kuwa cilmiga lehna darajooyin yuu koryeelayaa Eebana waxa la camal falii waa ogyahay.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذَا قِيلَ لَهُمْ تَسَحَّرُوا فِي الْمَجْلِسِ فَاذْهَبُوا فَيَسْجِدُ لِلَّهِ كَرًّا وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ فَانصُرُوا يَرْفَعِ اللَّهُ الَّذِينَ ءَامَنُوا سَوَاءً وَالَّذِينَ ءُوتُوا الْعِلْمَ دَرَجَاتٍ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿١١﴾

12. Kuwa xaqa rumeeyayow markaad Nabiga qaabilaysan hormariya Sadaqo, saasaa idiin khayr badan idiinna nadiif-san, haddaydaan helaynin Eebe waa dambi dhaaf badane Naxariis badane.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذَا نَزَلَ الرَّسُولُ فَقَدِّمُوا بَيْنَ يَدَيْ جُنُودِكُمْ صَدَقَةٌ ذَلِكَ خَيْرٌ لَّكُمْ وَأَطْهَرُ فَإِن لَّمْ تَجِدُوا فَإِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢﴾

13. Ma waxaad ka cabsateen inaad hormarsataan Sadaqooyin markaad Nabiga la kulmaysaan; haddaydaan saas falin Eebe waa idin ka toobad aqbalaye ee Salaadda ooga Sakadana bixiya Ilaahaay iyo Rasuulkiisana adeeca, Eebana waa ogyahay waxaad camal falaysaan.

ءَأَسْفَقْتُمْ أَن تَقْدِمُوا بَيْنَ يَدَيْ جُنُودِكُمْ صَدَقَاتٍ فَإِذ لَمْ تَفْعَلُوا وَتَابَ اللَّهُ عَلَيْكُمْ فَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَءَاتُوا الزَّكَاةَ وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ. وَاللَّهُ خَبِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٣﴾

Dadka xaqa rumeeyey waa inay Ilaahay iyo Nabigiisaba (Naxariis iyo nabad gelyaba korkiisa Eeba ha yeelee) ay maqlaan, dhexdoodana isu naxariistaan, Jihaad ka iyo Khayrkana u degdegaan, waxbarashada. Salaadda, Sakadiyo Sadaqadana ay ku dadaalaan si uu Eebe abaal gud fiican u siiyo.
Al-Mujaadalah (11-13).

14. Ma ogtahay kuwii ka sokeeye dhigtay kuwa Eebe u cadhooday ku-waasi idin ka mid ma aha iyagana ka mid ma aha (waa munaafiqiinta), waxayna ku dhaaran been iyagoo og.

* أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ تَوَلَّوْا قَوْمًا غَضِبَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مَّا هُمْ مِنْكُمْ وَلَا مِنْهُمْ وَيَحْلِفُونَ عَلَى الْكُذِبِ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿١٤﴾

15. Eebe wuxuu u darbay kuwaas cadaab daran, maxaa yeelay wax xun bay falayeen.

أَعَدَّ اللَّهُ لَهُمْ عَذَابًا شَدِيدًا إِنَّهُمْ سَاءَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿١٥﴾

16. Dhaartoodii bay gaashaan ka dhigteen dadkana xaqii bay ka leexiyeen waxayna mudan yihiin cadaab wax ihaaneeya.

أَتَّخَذُوا أَيْمَانَهُمْ جُنَّةً فَصَدُّوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ فَلَهُمْ عَذَابٌ مُهِينٌ ﴿١٦﴾

17. Xoolahooda iyo Caruurtoodu wax ugama taraan Eebe xaggiisa, waana kuwa ehlu Naar ah wayna ku waari.

لَنْ نَعْنِي عَنْتَهُمْ أَمْوَالَهُمْ وَلَا أَوْلَادَهُمْ مِنَ اللَّهِ شَيْئًا أُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿١٧﴾

18. Maalinta Eebe soo bixiyo dhammaantood way u dhaaran Eebe siday idinka idiinku dhaartaan iyagoo u malayn inay wax (xuja ah) haystaan, waase kuwo beenaalayaal ah.

يَوْمَ يَبْعَهُمُ اللَّهُ جَمِيعًا فَيَحْلِقُونَ لَهُ. كَمَا يَحْلِقُونَ لَكُمْ وَيَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ عَلَى شَيْءٍ أَلَا إِنَّهُمْ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴿١٨﴾

19. Waxaa ka qaalib noqday Shaydaan oo hilmaansiiyey xusidda Eebe, kuwaasi waa Xisbiga shaydaanka, Xisbiga shaydaankun waa kuwa khasaaray.

أَسْتَحْوَذَ عَلَيْهِمُ الشَّيْطَانُ فَأَنسَهُمْ ذِكْرَ اللَّهِ أُولَئِكَ حِزْبُ اللَّهِ أَلَا إِنَّ حِزْبَ الشَّيْطَانِ هُمُ الْخَالِفُونَ ﴿١٩﴾

Munaafiqiintu waa colka kuwa xaqa rumeeyey, waxayna had iyo jeer xiriir la yeeshaan Gaalada kale ayagoon Labada qolo midna ka tirsanayn, kuwaasna Eebe wuxuu ugu gooddiyey ciqaab daran, waana beenaalayaal Xisbiga shaydaanka ka mid ah, Naar iyo Khasaarana way la kulmi doonaan. Al-Mujaadalah (14-19).

20. Kuwa Ilaahay iyo Rasuulkiisa khilaafaya waxay ka mid noqon kuwa dullooba.

إِنَّ الَّذِينَ يُحَادُّونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ أُولَئِكَ فِي الْأَذْيَانِ ﴿٢٠﴾

21. Eebe wuxuu xugmiyey inuu adkaado isaga iyo Rasuulladiisa, maxaa yeelay waa xoog badane adkaade ah.

كَتَبَ اللَّهُ لَأَعْلَيْنَ أَنَا وَرُسُلِي إِنَّ اللَّهَ قَوِيٌّ عَزِيزٌ ﴿٢١﴾

22. Ma helaysid dad Ilaahay rumeeyey iyo Maalintii dambeysay oo haddana jecel ruux Ilaahay iyo Rasuulkiisa khilaafaya haba ahaadeen Aabayowgood, Caruurtooda, Walaalahood ama Qaraabadooda, kuwaas (aan jeclaanin) waa kuwo qalbigooda iimaanka lagu dhigay Eebena ku xoojiyey gargaarkii-sa, wuxuuna gelin Jannooyin Wabiyaal

لَا يَتَّخِذُ قَوْمًا يُوَفُّونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ يُوَادُّونَ مَنْ حَادَّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَلَوْ كَانُوا آبَاءَهُمْ أَوْ أَبْنَاءَهُمْ أَوْ إِخْوَانَهُمْ أَوْ عَشِيرَتَهُمْ أُولَئِكَ كَتَبَ فِي قُلُوبِهِمُ الْإِيمَانَ وَأَيَّدَهُمْ بِرُوحٍ مِنْهُ وَيُدْخِلُهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ

dhex socdaan ay kuna waari, kuwaas
Ilaahay baa ka raalli noqday iyana way
ka raalli noqddeen waana Xisbiga
Ilaahay; Xisbiga Ilaahayna waa kuwa
Liibaanay.

أُولَئِكَ حِزْبُ اللَّهِ أَلَا إِنَّ حِزْبَ اللَّهِ هُمُ
الْمُقْلِحُونَ ﴿٢٢﴾

Eebe wuxuu ballan qaaday in dadka xaqa ku taagani adkaadaan markay wixii Eebe faray yeelaan, xaqdiidayaashuna ay dulloobaan.

Jacaylka iyo Walaalnimaduna waa inay ahaato xaqa dartiis ee ayan noqonin sokeeyennimo qaraabo, kuwa ku walaalooba Eeba dartiina waa Xisbiga Ilaahay ee liibaanu u dambayn.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebow ha ugu yeelin Faajir iyo Faasiq Gacan iyo Nicmo agtayda. Al-Mujaadalah (20-22).



Suurat Al-Xashr



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Waxaa Eebe nasaha (sharifa) waxa Cirka iyo Dhulka ku dhexnool, waana xoog badane Falsan.

2. Eebe waax kan ka bixxiyey kuwii gaaloobay ee ahlu Kitaabka ahaa «Yuhuud» Guryahoodii kulmintii hore, idinkoon u malaynin inay bixi iyana waxay u maleeyeen in Guryahoodu wax ka celin, markaasaa Eebe uga yimid meel ayan filayn, qalbigoodana wuxuu ku tuuray cabsi, guryahooda waxay ku kharribeen (ku halleeyeen) gacmahooda iyo gacmaha kuwa rumeeyey, ee dadka Caqliga leh ha waano qaato.

3. Haddaan Eebe xukumin inay baxaan waxaa lagu caddibi lahaa Adduunka, Aakhirana waxaa u sugnaaday cadaab naareed.

4. Maxaa yeelay Ilaahay iyo Rasuulkiiisa yey khilaafeen, ruuxii Eebe khilaafta Ciqaabtiisu waa daran tahay.

5. Wixii aad gooyaan oo geed ah (ee Cadawga) ama aad daysaan iyadoo ku taagan Salkeeda waa idinka Eebe iyo inuu dulleeyo Faasiqiinta.

Yuhuuddii Magaalada Madiino Joogtay yaa Nabiga (naxariis iyo Nabad gelyo korkiisa Eebe hayelee) khiyaantay, hase ahaatee waxaa u dambeeyey dulli iyo Ciqaab illeen Ilaahay iyo Rasuulkiisa yey la Colloobeen sida caadada Yuhuudduduba tahay had iyo jeer, waana in lagu waano qaato Xaalkaas Jidka toosanna la qaadaa. Al-Xashr (1-5).

6. Wixii Xoola ah ee Ilaahay Nabiga uga soo celiyo Gaalada isagoon Fardo

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ
وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١﴾

هُوَ الَّذِي أَخْرَجَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ
مِنْ دِيَارِهِمْ لِأَوَّلِ الْحَشْرِ مَا ظَنَنْتُمْ أَنْ يَخْرُجُوا
وَوَطَّأُوا أَنفُسَهُمْ مَائِعَتُهُمْ حُصُوبُهُمْ مِنَ اللَّهِ فَأَنَّهُمْ
اللَّهُ مِنْ حَيْثُ لَمْ يَحْتَسِبُوا وَقَدَفَ فِي قُلُوبِهِمُ الرَّعْبَ
يَخْرُجُونَ بِيُوْنَهُمْ يَأْتِيهِمْ مِنَ الْأَيْدِي الْمُؤْمِنِينَ فَاتَّعَبُوا
بِتَأْوِيلِ الْأَنْصَابِ ﴿٢﴾

وَلَوْلَا أَنْ كَتَبَ اللَّهُ عَلَيْهِمُ الْجَلَاءَ لَعَذَّبُكُمْ فِي
الَّذِي بَاتْتُمْ فِي الْأَخْزِ عَذَابَ النَّارِ ﴿٣﴾

ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ شَاقُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَمَنْ إِشَاقَ اللَّهَ فَاِنَّ
اللَّهَ شَدِيدَ الْعِقَابِ ﴿٤﴾

مَا قَطَعْتُمْ مِنْ لِينَةٍ أَوْ تَرَكْتُمْ مِنْهَا قَائِمَةً عَلَى
أُصُولِهَا فَبِإِذْنِ اللَّهِ وَلِيُخْرِىَ الْفَاسِقِينَ ﴿٥﴾

وَمَا آفَأَ اللَّهُ عَلَى رَسُولِهِ مِنْهُمْ فَمَا أَوْجَفْتُمْ

iyo awr lagu dagaallamin waxaa amar-kiisa leh Nabiga, Eebana Cidduu doono yuu ku diraa Rasuulkiisa, wax walbana Eebe waa karaa.

7. Wixii Xoola aha ee Ilaahay ku soo celiyo ee uga yimaadda Degmooyinka Yuhuudda Rasuulkiisa; waxaa leh Ilaahay, Rasuulka, Qaraabada, Agoonta, Masaakiinta iyo Musafiriinta «sodaalka» si ayan u noqon wax ku wareegaysta kuwa Hodanka ah dhexdooda wuxuu Rasuulku dadka siiyo ama faro waa inay qaataan, wuxuu ka reebana waa inay ka reebmaan, Eebana waa in laga dhawrsado, maxaa yeelay Cigaabtuusu waa darantahay.

8. Waxaa Xoolahaas wax ku leh kuwa Saboolka ah ee ka soo hijrooday guryahoodii iyo Xoolahoodii dar Eebe iyo gargaarka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, waana kuwa ku run sheegay iimaan-kooda.

Xoolaha Gaalada si dagaal la'aan ah uga yimaadda waxaa loo yaqaan «Feey» waxaana lagu bixin Jidadka khayrka ah ee Aayaddu tilmaantay, Dadka xaqa rumeeyeyna waxaa ku waajib ah inay maqlaan hadalaka Rasuulka «Muxamed» ah (naxariis iyo nabad gelyaba Eebe korkiisa ha yeelee) waana in Cigaabta Eebe laga dhawrsadaa. Al-Xashr (6-8).

9. Kuwii Madiino deganaa ee Xaqa rumeeyey waxay jecel yihiin dadka u soo hijroon (u soo qixi) wax necbaansho ahna Laabta uma geliyaan dadkaas waxa la siiyay, waxayna Naftooda ka hormariyaan (ay uga doori) dadkaas inkastaba iyagu gaajo ha haysee, ruuxii laga dhawro bakhaylnimada Naftiisa waa mid Liibaanay.

10. Kuwa imaan Asxaabta Nabiga ka dib waxay Eebe weydiisan inuu u dambi dhaafo iyaga iyo Walaalahooda iimaan-ka uga hormaray uusan qalbigoodana

عَلَيْهِمْ مِنْ حَيْثُ وَلَا رِكَابٍ وَلَكِنَّ اللَّهَ يَسْلُطُ
رُسُلَهُ عَلَىٰ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٦﴾

مَا أَقَاءَ اللَّهُ عَلَىٰ رَسُولِهِ مِنْ أَهْلِ الْقُرَىٰ فَلِلَّهِ وَالرَّسُولِ
وَلِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسْكِينِ وَاتِّبَاعِ السَّبِيلِ كَيْ
لَا يَكُونَ دُولَةً بَيْنَ الْأَغْنِيَاءِ مِنْكُمْ وَمَا اتَّكُمُ
الرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَاكُمْ عَنْهُ فَانْتَهُوا وَاتَّقُوا اللَّهَ
إِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ ﴿٧﴾

لِلْفُقَرَاءِ الْمُهَاجِرِينَ الَّذِينَ أُخْرِجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ
وَأَمْوَالِهِمْ يَبْتَغُونَ فَضْلًا مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانًا
وَيَضُرُّونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ أَوْلَئِكَ هُمُ الصَّادِقُونَ ﴿٨﴾

وَالَّذِينَ تَبَوَّءُوا الدَّارَ وَالْإِيمَانَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَيَجْهَرُونَ
هَاجِرًا بِنِهْمَةٍ وَلَا يُجِدُونَ فِي صُدُورِهِمْ حَاجَةً
مِمَّا أُوتُوا وَيُؤْذِنُونَ عَلَىٰ أَنْفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ
حَصَاصَةٌ وَمَنْ يُوَفِّ شَيْءًا نَفْسِهِ فَاُولَئِكَ
هُمُ الْمُقْلِحُونَ ﴿٩﴾

وَالَّذِينَ جَاءُوا مِنْ بَعْدِهِمْ يَقُولُونَ رَبَّنَا اغْفِرْ لَنَا
وَلِإِخْوَانِنَا الَّذِينَ سَبَقُونَا بِالْإِيمَانِ وَلَا تَجْعَلْ
فِي قُلُوبِنَا غِلًّا لِلَّذِينَ آمَنُوا رَبَّنَا إِنَّكَ رَءُوفٌ

xiqdi yeelin kuwa rumeeyey Eebena
waa naxariis badane.

تَجِيرُ ﴿١٠﴾

Ansaartii Nabiga (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Eebe ha yeelec) waxay ahaayeen duul la yaab leh, siday u jeclaayeen una taakuleeyeen Muslimiintii soo hijrootay ee Maka ka soo qaxay Eebe dartiis, iyagana Naftooda uga doori jireen (Eebe ha ka raalli noqdee) kuwa xaqa rumeeyey ee dib ka imaan waa inay jeclaadaan Muslimiinta ka horreysay uguna duceeyaan dambi dhaaf iyo Khayr illeen dadaal badan bay Islaamka u sameeyeen.

Nabigu wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelec) Dulmi iska jira waa mugdiga Qiyaame. Bakhaylnimana iska jira iyadaa halaagtay kuwii idinka horeeyeye. Waxaa wariyey Muslim. Al-Xashr (9-10).

11. Ma ogtahay in kuwii Munaafiqiinta ahaa ay ku dhihi kuwii gaalobay ee Yuhuudda ahaa haddii laydin bixiyo waan idinla jiraynaa Cid aan idiin maqlaynana ma jirto waligeed, haddii laydinla dagaallamana waan idiin gargaaraynaa, Ilaahayna waa ogyahay inay Beenaalayaal yihiin.

* أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ نَافَقُوا يَقُولُونَ لِإِخْوَانِهِمُ
الَّذِينَ كَفَرُوا مِن أَهْلِ الْكِتَابِ لَئِن أُخْرِجْتُمْ
لَتَخْرُجُنَّ مَعَكُمْ وَلَا تَطِيعُ فِيكُمْ أَحَدًا أَبَدًا وَإِن
قُوتِلْتُمْ لَنَنْصُرَنَّكُمْ وَاللَّهُ يَشْهَدُ إِنَّهُمْ
كَذِبُونَ ﴿١١﴾

12. Haddii la bixiyo Yuhuudda lama baxaayaan haddii lala dagaallamana uma gargaarayaan hadday isku dayaan inay u gargaaraanna way carari loomana gargaarayo.

لَئِن أُخْرِجُوا لَا يَخْرُجُونَ مَعَهُمْ وَلَئِن قُوتِلُوا
لَا يَنْصُرُوهُمْ وَلَئِن نَّصَرُوهُمْ لَيُولَيَنَّ الْأَدْبَارَ
ثُمَّ لَا يَنْصُرُونَ ﴿١٢﴾

13. Mu'miniinta yey uga cabsi badan yihiin Yuhuuddu Ilaahay, maxaa yeelay waa dad aan wax garad ahayn.

لَأَنَّهُمْ أَشَدُّ رَهَبًا فِي صُدُورِهِمْ مِنَ اللَّهِ
ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَفْقَهُونَ ﴿١٣﴾

14. Kuwa xaqa rumeeyeyna lama da-gaallami karaan «dhufaysyo iyo Gidaaro dhexdood mooyee» dhibka dhexdooda ahna waa daranyahay waxaad mooddaa inay wadajiraan, qu-luubtooduna waa kala tagsan tahay, maxaa yeelay waa dad aan wax kasayn.

لَا يَقْتُلُونَكُمْ جَمِيعًا إِلَّا فِي قُرَى مُّحَضَّنَةٍ أَوْ مِن وَرَاءِ
جُدُرٍ بَأْسُهُمْ بَيْنَهُمْ شَدِيدٌ تَحْسَبُهُمْ جَمِيعًا
وَقَلُوبُهُمْ شَتَّىٰ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَعْقِلُونَ ﴿١٤﴾

Munaafiq had iyo jeer wuxuu la joogaa dhibka Muslimiinta, Munaafiqiintii Madiino joogayna waxay gacan siin jireen Yuhuudda oo ay ka dhigan jireen sokeeye Labada qolobana waxay ahaayeen, yihiinna had iyo jeer Colka Diinta Islaamka waana laga adkaan haddii dad toosan oo xaqa rumeeyey la helo, maxaa yeelay waa wax ma garad. Al-Xashr (11-14).

15. Waxay la mid yihiin gaaladii dha-waa ee ka horreeyey ee dhadhamiyey

كَمَثَلِ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ قَرِيبًا ذَاتُ أُولِي أَلْبَابٍ

cidhibtii camalkoodda, Cadaab daran-na u sugnaaday.

أَمْرِهِمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٥﴾

16. Waxay la mid yihiin Shaydaan markuu qof ku yidhi gaalow, markuu gaaloobana ku yidhaah bari baan kaa ahay (waxba isuguma keen jiraan) oo sheegta inuu Ilaahay ka yaabi.

كَمَثَلِ الشَّيْطَانِ إِذْ قَالَ لِلْإِنْسَانِ اكْفُرْ فَلَمَّا كَفَرَ قَالَ إِنِّي بَرِيءٌ مِّنكَ إِنِّي أَخَافُ اللَّهَ رَبَّ الْعَالَمِينَ ﴿١٦﴾

17. Markaasay Labadooduba Cidhibtoodu noqon naar ay ku waaraan, daalimiintana saasaa lagu abaal mariyaa.

فَكَانَ عَاقِبَتُهُمَا أَنَّهُمَا فِي النَّارِ خَالِدِينَ فِيهَا وَذَلِكَ جَزَاءُ الظَّالِمِينَ ﴿١٧﴾

18. Kuwa xaqa rumeeyey waa inay Eebe ka dhawrsadaan, Nafwalbana waa inay eegtaa waxay u hormarsatay barri (qiyaamaha) Eebena ha laga yaabo illeen wax walba waa ogyahaye.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَلا تَنْظُرُوا نَفْسَ مَا قَدَّمْتُمْ لِعَدُوِّكُمْ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ خَبِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٨﴾

Kibir iyo islaweyni wax matarto, aaway kuwii iskibriyey ee beeniyeey Nabiyadii ka horreysay Nabi (Muxamed) (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Eebe hayelec), gaaladuna waxbay dhumiyaan sida Shaydaanka, Ciddii wax dhumisa iyo midda la dhumiyaba waxay Cidhibtoodu noqon Khasaare iyo Naar. Al-Xashr (15-18).

19. Kuwa xaqa rumeeyey waa inayan noqon sidii kuwii Eebe hilmaamay, isna markaas uu hilmaansiiyey naftooda waana kuwo faasiqiin ah (xaqa ka leexday).

وَلا تَكُونُوا كَالَّذِينَ نَسُوا اللَّهَ فَأَنسَهُمْ أَنفُسَهُمْ أُولَئِكَ هُمُ الْفٰسِقُونَ ﴿١٩﴾

20. Ma eka Ahlu naarka iyo Ahlu Jannaha, Ahlu Jannuhu waa kuwa liibaanay.

لَا يَسْتَوِي أَصْحَابُ النَّارِ وَأَصْحَابُ الْجَنَّةِ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ هُمْ الْفٰلِحُونَ ﴿٢٠﴾

21. Haddii quraankan Eebe Buur ku dejiyo (kula hadlo) waxaad arki lahayd Buurtii oo khushuucsan oo dillaaci cabsi Eebe darteed, saasaa Eebe ma-taallo ugu sheegaa dadka inay fikiraan darteed.

لَو أَنزَلْنَا هَذَا الْقُرْءَانَ عَلَى جَبَلٍ لَّرَأَيْتَهُ خٰشِعًا مُّصَدِّعًا مِّنْ خٰشِيَةِ اللَّهِ وَقِيلَ الْأَمثلة نَصْرٌ مِّنَّا لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿٢١﴾

22. Ku xaq lugu caabudo oon Allaah ahayn ma jiro, waxa maqan iyo waxa joogaba waa ogyahay, waana kan naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

هُوَ اللَّهُ الَّذِي لا إِلٰهَ إِلاَّ هُوَ عَلَيْهِ التَّوْبَةُ وَالشَّهَادَةُ هُوَ الرَّحْمٰنُ الرَّحِيمُ ﴿٢٢﴾

23. Ku xaq lugu caabudo oon Allaah ahayn ma jiro, waa Xaakim Daahir ah, nabadgeliye, rumeeye, wax walbana ilaaliye xoog iyo weynaan isagaa leh, waana ka nasahan yahay waxay Cibaa-dada la wadaajinayaan.

هُوَ اللَّهُ الَّذِي لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْمَلِكُ الْقُدُّوسُ
السَّلَامُ الْمُؤْمِنُ الْمُهَيَّمِنُ الْعَزِيزُ الْجَبَّارُ
الْمُتَكَبِّرُ سُبْحَانَ اللَّهِ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿١٣﴾

24. Eebe waa kan wax abuura ee ahaysiia sawirana, Magacyo fiicanna wuu leeyahay waxaana Eebe u tasbiix-sada (weyneeya) waxa Cirka iyo dhulka ku sugan, waana adkaade falsame.

هُوَ اللَّهُ الْخَلِيقُ الْبَارِئُ الْمُصَوِّرُ لَهُ الْأَسْمَاءُ
الْحُسْنَى يُسَبِّحُ لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ
وَالْأَرْضِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١٤﴾

Ruuxa xaq rumeeyey waa inuu had iyo jeer Eebe xusaa kuna xirnaadaa, si aan Eebe, Naftiisa u hilmaansiin, Jidka fiicanna waa inuu qaadaa illeen Janno iyo naar ma sinnee, quraankan sharafta lehna waa inuu rumeeyaa kuna dhaqmaa, Ilaaha awoodda leh ee isaga mooyee Ilaah kaloo xaq lugu caabudaa uusan jirinna waa inuu Caabudaa oo rumeeyaa. Al-Xashr (19-24).



Suurat Al-Mumtaxinah



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Kuwa xaqa rumeeyow ha ka dhigan-nina colka Eebe iyo Colkiinna (Gaalada) sokeeye aad jacayl u gudbinaysaan, iyagoo ka gaalobay xaqa idiin yimid, oo haddana bixiya Rasuulka iyo Muu-miniinta inaad Eebe rumeeyseen dar-teed haddii soo bixiddiinu ay ahayd jidka Allaah inaad ku jihaaddaan, raalli ahaanshadiisana rabtaan (gaala ha je-claannina), kuwaas ood u qarisaan jacayl, Ilaahayna waa ogyahay waxaad qarinqaysaan iyo waxaad muujinaysaan-ba, Ruuxii saas yeelana Jidka xaqa ah wuu ka dhumay.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا لَا تَتَّخِذُوا عَدُوِّي وَعَدُوَّ أَوْلِيَآءِ
تُكْفِرُونَ إِلَيْهِمْ بِالْمُؤَدَّةِ وَقَدْ كَفَرُوا بِمَا جَاءَهُمْ مِنَ الْحَقِّ
يُخْرِجُونَ الرَّسُولَ وَإِنَّا نَكْفُرُهُمْ إِن نَّوْمِنُ بِاللَّهِ رَبِّكُمْ إِن
كُنْتُمْ حَرَجْتُمْ جَهَنَّمَ إِنِّي سَبِيلِي وَأَسْبَغَآءُ مَرْضَاتِي
لَيْسُ رُونَ إِلَيْهِمْ بِالْمُؤَدَّةِ وَأَنَا أَعْلَمُ بِمَا أَخْفَيْتُمْ وَمَا
أَعْلَمْتُمْ وَمَنْ يَفْعَلْهُ مِنْكُمْ فَقَدْ ضَلَّ سَوَآءَ السَّبِيلِ ﴿١﴾

2. hadday idin helaan (Gaaladu) waxay idiin noqon Col gacmaha iyo Carabka-na xumaan bay idiinku taagi waxayna jecel yihiin innad gaalowdaan.

إِن يَشْفِقُوا عَلَيْكُمْ إِنَّمَا يَشْفِقُونَ عَلَىٰ آبَائِهِمْ
وَأَسْبَآئِهِمْ بِالسُّوءِ وَوَدُّوا لَوْ كَفَرُوا ﴿٢﴾

3. Qaraabada iyo Caruurtu waxba idiin ma taraan Maalinta qiyaame waana laydin kala kaxayn, Ilaahayna waa arkaa waxaad Camal falaysaan.

لَن تَنفَعَكُمْ أَرْحَامُهُمْ وَلَا أَوْلَادُهُمْ يَوْمَ الْقِيَمَةِ يَفْصَلُ
بَيْنَكُمْ وَاللَّهُ يَمَّا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٣﴾

Colka Eebe iyo Colkaaga inaad Saaxiib ka dhigataa ma habboona, Gaaladuna waxay Muslimiinta kula colloobeen waa Diinta Islaamka ah kaliya, ruuxii Muslim sheegan oo Gaalo Cadaw ah jacayl u qariyana waa ruux dhumay oo leexday, Gaaladana Sokeeyannimo ma leh ee waa in saa lala soodaa. Aayaduhuna waxay soo dageen mar nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelce) uu u darbaday in Mako la soo furo markaas Nin gaadhsiiyey ree Makaad arrintaas. Al-Mumtaxinah (1-3).

4. Kuwa xaqa rumeeyey waa inay ku daydaan Nabi Ibraahim iyo kuwii la jiray waa kuwii iska bari yeelay Gaaladii Qoonkoodii ahayd (ay isla noolaayeen) iyo waxay Caabudayeen ee

فَدَكَاتَ لَكُمْ سُوءُ حَسَنَةٍ فِي إِبْرَاهِيمَ وَالَّذِينَ مَعَهُ
إِذْ قَالُوا لَقَوْمُهُمْنَا تَابِرُوا مِنَّا وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِن
دُونِ اللَّهِ كَثْرَتًا يُكْرَهُمْ وَيَسْتَأْذِنُ بَيْنَهُمْ وَالْعَدُوَّةَ وَالْبَغْضَاءَ

Eebe ka soo hadhay oy Colnimo u muujiyeen ilaa ay Eebe kaliya ka rumeeyaan, laakiin Nabi Ibraahim wuxuu u dambi dhaaf weydiyey Aabihiis, isagoon waxba u hanan karin (intaan laga reebin Arrintaas). Eebe yeynu talo saaran, isagaan u toobad keenaynaa, isagaana loo noqon (Aakhiro).

5. Eebow hannagu fidnaynin kuwa Gaaloobay, noona dambi dhaaf illeen waxaad tahay adkaade (Casiis) Falsan.

6. Haku daydo dadkaas dayasho wanaagsan ruuxii dooni Ilaahay iyo Maa-linta Aakhiro, ciddiise ka jeedsata xaqa Eebe waa ka kaaftoon yahay waana ammaananyahay.

Ruuxa fiican ee Sharafta leh ee Eebe ka yaaba waxa wanaagsanna sameeya, xumaantana ka fogaada waa in lagu daydo sida kan xunba looga fogaado. Eebana waa in lagu xidhaado loona toobad keeno, isagaa loo noqon Gaaladana waa inaan la jeclaanin lagana digtoonaadaa. Al-Mumtaxinah (4-6).

7. Wuxuu Eebe u dhawyahay inuu yeelo jacayl Mu'miniinta iyo kuway la col-loobeen ee Gaalada Quresheed ah dhaxdooda, maxaa yeelay Eebe wax walba waa karaa waana dambi dhaaf badane naxariis badane ah.

8. Eebe kama reebayo kuwa xaqa rumeeyey inay u samo iyo Caddaalad falaan kuwa aan Diinta kula dagaallamin Guryahoodana ka bixinnin, maxaa yeelay Eebe waa jecel yahay kuwa Caadiliinta ah (Garsoor).

9. Eebe wuxuu ka reebi kuwa xaqa rumeeyey inay ka sokeeye yeeshaan oo xidhiidhiyaan kuwa Diinta kula dagaallamay ee Guryahoodii ka bixiyey gacanna ku siiyey in guryaha laga bixiyo, dadkii kuwaas sokeeye ka dhigtaa wa kuwa daalimiin ah.

أَبَدًا حَتَّىٰ تُوْمِنُوا بِاللَّهِ وَحَدِيثِ آلِ قَوْلِ إِبْرَاهِيمَ لِأَبِيهِ
لَأَسْتَغْفِرَنَّ لَكَ وَمَا أَمْرُكَ لَكَ مِنَ اللَّهِ مِنْ شَيْءٍ
رَّبَّنَا عَلَيْنَا نَوْمُكَ وَإِلَيْكَ آتَيْنَا وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ ﴿٤﴾

رَبَّنَا لَا تَجْعَلْنَا فِتْنَةً لِلَّذِينَ كَفَرُوا وَاعْفُ رَنَا رَبَّنَا إِنَّكَ
أَنْتَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٥﴾

لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِيهِمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِّمَن كَانَ يَرْجُوا اللَّهَ
وَالْيَوْمَ الْآخِرَ وَمَن يَتَوَلَّ فَإِنَّ اللَّهَ هُوَ الْعَلِيُّ الْحَمِيدُ ﴿٦﴾

* عَسَىٰ اللَّهُ أَن يَجْعَلَ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَ الَّذِينَ عَادَيْتُم مِّنْهُمْ
مُّوَدَّةً وَاللَّهُ قَدِيرٌ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٧﴾

لَا يَهْتَدِكُمْ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ لَمْ يُقَاتِلُوكُمْ فِي الدِّينِ
وَلَمْ يُخْرِجُوكُم مِّن دِيَارِكُمْ أَن تَبَرُّوهُمْ وَتُقْسِطُوا إِلَيْهِمْ
إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ ﴿٨﴾

إِنَّمَا يَهْتَدِكُمُ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ قَاتَلُوكُمْ فِي الدِّينِ
وَآخَرُجُوكُم مِّن دِيَارِكُمْ وَظَهَرُوا عَلَيْكُمْ أَن تَوَلَّوهُمْ
وَمَن يَتَوَلَّهُمْ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿٩﴾

Eebeheen isagaa awood leh, Cidduu doonana wuu hanuuniyaa, waxaana dhacay in dad Gaaladii Qureesheed ka mid ah Islaameen, wanaag iyo Walaalnimana dhexmartay Muslimiintii kale, waase inaan Gaal kula dagaallamay wanaag loo samaynin, kuwase aan Col Muslimiinta la noqonin Gaaladana aan gacan ku siinnin dhibka Muslimiinta ma reebbana in wanaag loo falo, taasina waxay ina tusin inaan kala garanno Colkeenna iyo Saaxiibkeenna.

Xadiith waxaa ku sugnaaday: kaad jeclaan tartiib u jeclow inaad nacdaa laga yaabaa, kaad necbaanna tartiib u nac inaad jeclaataa laga yaabaa Maaline. Al-Mumtaxinah (7-9).

10. Kuwa xaqa rumeeyow hadday idiin yimaaddaan Haween Mu'miniin ah oo Gaalada ka soo Hijrooday (ka soo tegay) Imtixaana (inay ka dhab tahay iyo in kale) Eebaa og Iimaankooda, haddaad ogaataan inay xaqa (dhabnimo) u rumeeyeen waa inaydaan Gaalada u celinin, maxaa yeelay Xalaal isuma aha Meherkiina ha u celiyeen Gaalada, inaad isguursataanna waxba kuma jiro haddaad Meher siinaysaan, Haweenka Gaalooba Nikaax isuguma kiin xirna ee ha haysannina, weydiista waxaad Meher u bixiseen Gaaladuna ha weydiisato waxay Meher u bixiyeen, xaaladaasina waa xukunka Eebe uu dhexdiinna xukumay, Ilaahayna waa ogyahay (waxa la Camal falo) waana Falsame.

11. Hadday u tagaan kuwa Haweenkiinna kamid ah Gaalada (Gaalobaan) markaas ka dib la qaniimaysto hala siiyo kuwii Haweenkoodu tageen waxay ku masruufeen oo kale, Ilaaha aad rumaysantihiinna ka dhawrsada.

Gaaladu waa inayan Muslimiinta awood ku yeelannin, saas daraaddeed hadday soo islaamto haweenay Ninkeedu Gaal yahay looma celiyo, maxaa yeelay xalaal isuma aha, waase in la Imtixaamo si runta loo ogaado, markaas ka dib hadday nin Muslim ah guursato dhib kuma jiro iyadoo laysu celin wixii kharash ahaa, taasuna waxay ku tusin inay waajib tahay dhawritaanka Sharafka Islaamka iyo ruuxa Muslimka ah, waxaa kale ooy ina tusin Caddaaladda Islaamka xataa Mucaamilada Gaalada. Al-Mumtaxinah (10-11).

12. Nabiow hadday kuu yimaaddaan haween xaqa rumeeyey si ay kuugula ballantamaan inay Eebe kaliya caabudaan, waxna xadin, sinaysanna, Caruurtoodana dilin, been abuurna ayan

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذْ أَجَاءَكَ الْمُؤْمِنَاتُ مَهْجُرَاتٍ
فَأَمَّحُوهُنَّ اللَّهُ أَعْلَمَ بِإِيمَانِهِنَّ فَإِنَّ عَلَيْهِنَّ
مُؤْمِنَاتٍ فَلَا تَرْجِعُوهُنَّ إِلَى الْكُفَّارِ لَأَهُنَّ حِلٌّ لَهُمْ
وَلَا هُمْ يَحِلُّونَ لَهُنَّ وَءَأْوَهُمْ مَأْنَفَقُوا وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكَ
أَنْ تَنكِحُوهُنَّ إِذَا ءَاتَيْتُمُوهُنَّ أَجْرَهُنَّ وَلَا تَمْسِكُو
بِعَصْمِ الْكُوفِ وَسْءَلُوا مَأْنَفَقَةً وَلَيْسَ لَكُمْ عَلَيْهِنَّ
ذَلِكُمْ حُرْمٌ ۗ إِنَّ اللَّهَ يَكْفُرُ بَيْنَكُمْ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿١٠﴾

وَإِنْ فَاتَكُمْ شَيْءٌ مِّنْ أَرْوَاحِكُمْ إِلَى الْكُفَّارِ فَعَاتِبْتُمْ
فَعَاوُاْ الَّذِينَ ذَهَبَتْ أَرْوَاحُهُمْ يُشَلُّ مَا أَنفَقُوا وَٱنْفَعُوا
ٱللَّهُ ٱلَّذِي أَنشَأَهُمُ ۗ مُّؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

يَأْتِيهَا النَّبِيُّ إِذْ أَجَاءَكَ الْمُؤْمِنَاتُ يُبَايِعُنَّكَ عَلَىٰ أَنْ
لَّا يُشْرِكْنَ بِٱللَّهِ شَيْئًا وَلَا يُسِرْنَ وَلَا يُزَيِّنْنَ وَلَا يَقْتُلْنَ
أَوْلَادَهُنَّ وَلَا يَأْتِينَ بِبُهْتَانٍ يَفْتَرِينَهُ بَيْنَ أَيْدِيهِنَّ


la imaan, wax wanaag ah oo la farayna ayan Nabiga ku caasiyin la ballantan una dambi dhaaf weydii Eebe waa dambi dhaafe naxariiste ahe.

وَأَرْجُلَهُنَّ وَلَا يَعْصِيَتَكَ فِي مَعْرُوفٍ قَبَائِعَهُنَّ
وَأَسْتَغْفِرُ لَهُنَّ اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٣﴾

13. Kuwa xaqa rumeeyow haka sokeeye dhigannina kuwa Eebe u carooday oo aakhirana ka quustay (waa Gaaloo dhane) sida Gaaladu uga quusatay kuwii dhintay.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَوَلَّوْا قَوْمًا غَضِبَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ
قَدْ يَسُؤُوا مِنَ الْآخِرَةِ كَمَا يَبِيسُ الْكُفَّارُونَ أَصْحَابِ
الْقُبُورِ ﴿١٣﴾

Ruuxii xaqa rumeeyey oo la ballantama Madaxda Muslimka ah kuna ballan qaadi inuu xumaanta ka dheeraado wanaagna la yimaada waa in lala ballantamaa, sida Eebaba faray Nabiga (naxariis iyo nabad gelyi Eebe korkiisa ha yeclee) inuu haweenka Muslimka ah ka oggolaado ballan qaadka, tan kale waa inaan gaalo Eebe u carooday oo Aakhiro iyo Maalinta abaal marinta ka quustay sokeeye iyo qaraabo laga dhigannin, illeen waxaa lugu walaaloobaa Caqiidada Islaamke. Al-Mumtaxinah (12-13).



Suurat Aş-Şaff

سُورَةُ الصَّفِّ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa Ilaahay nasaha (weyneeya) waxa Cirka iyo Dhulka ku sugan, Eebana waa adkaade falsan.

سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ
وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١﴾

2. dadka xaqa rumeeyayow maxaad u sheegaysaan wax aydaan falaynin.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لِمَ تَقُولُونَ
مَا لَا تَفْعَلُونَ ﴿٢﴾

3. Waxaa Cadho weyn Eebe agtiisa ku ah inaad sheegtaan wax aydaan falaynin.

كَبُرَ مَقْتًا عِنْدَ اللَّهِ أَنْ تَقُولُوا
مَا لَا تَفْعَلُونَ ﴿٣﴾

4. Eebe wuxuu jecel yahay kuwa ku dagaallama Jidkiisa (Jihaadka) iyagoo Saf ah oo aad mooddo dhismo laysku dhejiyey (midnimadooda).

إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الَّذِينَ يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِهِ صَفًّا
كَأَنَّهُمْ بُدَيْنٌ مَرْصُومٌ ﴿٤﴾

Samaawaatka iyo Dhulkaba wax ku sugan Ilaaheen baa abuuray, isagayna ka amar qaataan wayna u khushuucan, maxaa yeelay isagaa awood leh, kuwa Mu'miniinta ahna waa inay wax dhab ah qabtaan oo khayr ah ee ayan sheegannin wax ayan falin, maxaa yeelay taas Eebe ma jecel' waana in Jidka xaqa ah lagu Jihaado si isku duubni ah, si gargaarka Eebe iyo nasrigiisa loo helo.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelec) Calaamada Munaafiqu waa Saddex: Hadduu ballamo wuu baajiyaa, Hadduu sheekeeyana wuu Been sheegaa, Haddii la aaminana wuu khayaamaa. Waa saxiix. Aş-Şaff (1-4).

5. Xusuusta markii (Nabi) Muuse ku yidhi dadkiisii maxaad ii dhibaysaan idinkoo og inaan Rasuul Eebe idiin ahay, markay xaqii ka iisheen yaa Eebana sii iilay qalbigooda, Ilaahayna ma hanuuniyo kuwa faasiqiinta ah.

وَإِذْ قَالَ مُوسَى لِقَوْمِهِ يَا قَوْمِ لِمَ تَقُولُونَ
وَقَدْ تَعْلَمُونَ أَنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكُمْ فَلَمَّا زَاغُوا
أَزَاعَ اللَّهُ قُلُوبَهُمْ وَأَلَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ
الْفَاسِقِينَ ﴿٥﴾

6. xusuusta maka (nabi) Ciise ibnu Maryama ku yidhi Bani Israa'iil wa-xaan ahay Rasuul Eebe idiin soo diray oo rumayn Kitaabkii Tawraad ee hor-reeyey, kuna bishaarayn Rasuul ga-

وَإِذْ قَالَ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ يَا بَنِي إِسْرَائِيلَ إِنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكُمْ
مُحْصَدًا فَمَا لِمَ آيَنَ بَيْنَ يَدَيْ مِنَ التَّورَةِ وَمُبَشِّرًا بِرَسُولٍ يَأْتِي
مِنَ بَعْدِي اسْمُهُ أَحْمَدٌ فَلَمَّا جَاءَهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ قَالُوا هَذَا

daashayda imaan oo Magaciisuna yahay «Axmed», markuu xuja cad ula yimidna waxay dheheen kani waa sixir cad.

سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٦١﴾

Muslimiintu waxay rumayn Nabiyadii iyo Rusushii Eebe khalqiga u soo diray oo dhan, iyagoon kala qaadaynin, siday u rumeeyeen Kutubta Eebe ee saxa ah. waxayna Aayadahanu ina tusin in xaqu mid kaliya yahay, hase-yeeshee Gaaladu ay kala qaybiyaan si ay qaar u beeniyaan, waxaa kale oo ku cad Aayadahan in Nabi Ciise ku bishaareeyey soo bixitaanka Nabi Muxamed (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Eebe ha yeelee), taasina waxay xuja ku tahay gaalada Nabiga beenin. Aş-Şaff (5-6).

7. yaa ka dulmi badan ruux ku been abuurtay Ilaahay isagoo loogu yeedhi Islaamka, Eebe ma hanuuniyo dadka daalimiinta ah.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنْ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ وَهُوَ يُدْعَىٰ إِلَى
الْإِسْلَامِ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴿٧﴾

8. Waxay doonayaan (Gaaladu) inay Nuurka (xaqa) Eebe ku bakhtiiyaan Afkooda Eebena wuu taam yeeli nuurkiisa haba naceen Gaaladuye.

يُرِيدُونَ لِيُظْفِقُوا نُورَ اللَّهِ بِأَفْوَاهِهِمْ وَاللَّهُ مُنِيرُ نُورِهِ
وَلَوْ كَرِهَ الْكَافِرُونَ ﴿٨﴾

9. Eebe waa kan diray Rasuulkiisa isagoo hanuun wada iyo Diin xaq ah si uu (Eebe) Diimaha oo dhan uga sare mariyo haba naceen Mushrikiintuye (Gaaladu).

هُوَ الَّذِي أَرْسَلَ رَسُولَهُ بِالْهُدَىٰ وَدِينِ الْحَقِّ لِيُظْهِرَهُ
عَلَى الدِّينِ كُلِّهِ ۗ وَلَوْ كَرِهَ الْمُشْرِكُونَ ﴿٩﴾

Xaqoo la diidaa waa dulmi iyo gardarro, mana aha in ruuxii xaq loogu yeedho ka abaal daro oo diiddo beenin kala soo horjeedsado, hasa ahaatee wuxuu Eebe ballan qaaday in xaqu sare maro gaar ahaan hanuunkii uu dunida u soo saaray isagoo u soo dhiibay Rasuulkiisii Maxamed ahaa (naxariis iyo nabhadgelyo Eebe korkiisa ha yeelee), ruuxa Caqliga lehna waxaa ku waajib ah in marka xaq iyo wanaag loogu yeero uu raacaa oo aqbalaa. Aş-Şaff (7-9).

10. Kuwa xaqa rumeeyow ma idin tusiyaa ganacsi idinka koriya Cadaab daran.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا أَهْلَ الذِّكْرِ عَلَىٰ تَجَارِعِكُمْ مِنَ
عَذَابِ الْعِبرِ ﴿١٠﴾

11. Waxaad rumaynaysaan Ilaahay iyo Rasuulkiisa waxaadna ku dagaallamaysaan jidkiisa xaqa ah Xoolihiinna iyo Naftiinna idinkoo u huri, saasaana idiin khayr roon haddaad tihii kuwo wax og.

تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ ۚ وَتُجَاهِدُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ بِأَمْوَالِكُمْ
وَأَنْفُسِكُمْ ذَلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١١﴾

12. Markaas Eebe dambigiinuu dhaafi wuxuuna idin gelin Jannooyin ay dhex

يَعْمَلُونَ لَكُمْ دُونَكُمْ وَيُؤْتِكُمْ حَتَّىٰ تَجْرُوا مِنْ تَحْتِهَا

socdaan Webiyaal iyo Guryo wanaagsan oo ku dhex yaalla Jannada Cadnin (nagaanshaha), taasina waa liibaan weyn.

الْأَنْهَارُ وَمَسْكَنٌ طَيِّبَةٌ فِي جَنَّاتٍ عَدْنٍ
ذَلِكَ الْقَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿١٢﴾

13. Arrin kale ood jeceshihiinna (wuu idin siin) waa gargaarka Eebe iyo fatxi (guul) dhaw, kuwa xaqa rumeeyeyna u bishaaree.

وَأُخْرَىٰ مُجُودًا نَّصَّرُ مِنَ اللَّهِ وَفَتْحٌ قَرِيبٌ
وَبَشِيرٌ الْمُؤْمِنِينَ ﴿١٣﴾

14. dadka xaqa rumeeyow noqda gargaarayaasha Eebe sidii kuwii Nabi Ciise ibnu Maryama Saaxiibbadiis ahaa (Xawaariyintii) ee uu ku yidhi yaa Eebe iila gargaara, markaas ay dheheen annagaa ah gargaarayaashii Eebe, ka dib ay xaqa rumaysay koox Banii Israa'iil ka mid ah, kooxna ay ka gaalawday; Eebena ayiday (xoojiyey) kuwii xaqa rumeeyey (kana adkaadeen Cadawgoodii) oo iyagu ka muuqdeen (ka taliyeen) dhulkii.

يَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا كُرُوبًا أَنْصَارَ اللَّهِ كَمَا قَالَ عِيسَى ابْنُ
مَرْيَمَ لِلْحَوَارِيِّينَ مَنْ أَنْصَارِي إِلَى اللَّهِ قَالَ الْحَوَارِيُّونَ نَحْنُ
أَنْصَارُ اللَّهِ قَامَتِ طَائِفَةٌ مِنْ بَنِي إِسْرَائِيلَ وَكَفَرَتْ
طَائِفَةٌ فَأَيَّدْنَا الَّذِينَ ءَامَنُوا عَلَىٰ عَدُوِّهِمْ فَأَصْبَحُوا
ظَاهِرِينَ ﴿١٤﴾

Aayadahan waxay caddayn in Ganacsiga ugu khayr badani ee dambiga lagu dhaaf Jannana lagu galo uu yahay Eebe iyo Rasuulkiisa oo la rumeeyo iyo Jidkiisa oo lagu dagaallamo Xoola iyo Nafba' si loo daafaco xaqa loona helo nasri iyo Guul, lana noqdo sidii xawaariyintii (Saaxiibbadii) Nabi Ciise, Dhulkana loo hadho isagoo khayr lagu maamuli. Aş-Şaff (10-14).



Suurat Al-Jumucah

سُورَةُ الْجُمُعَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Waxaa Eebe nasihi (weynayn) waxa samooyinka iyo Dhulka ku sugan, Ilaahay waa xaakin Xumaan ka daahirane ah aadkaade falsame ah.

2. Eebe waa kan u soo bixiyey kuwaan wax aqoon Rasuul ka mid ah oo ku akhriya korkooda Aayaadkiisa «quraankana» bara iyo Sunnada (Nabiga) waxayna horey u ahaayeen kuwo baadi cad ku sugan.

3. (Waxaa kale oo Eebe Nabiga u diray) kuwo kale oon weli la kulmin kuwaas, Eebena waa Adkaade falsame ah.

4. Arrintaasuna (Islaamka iyo Nabiga la soo diray) waa deeq Ilaah, wuxuuna siin ruuxuu doono Eebana waa deeq iyo fadli weyne.

Waxaa ilaahay u khushuuca waxa uu ku abuuray Cirka iyo Dhulka' illeen isagaa awood leh, waana kan addoomadiisa wannagga u falay ee u soo diray Rasuul bani Aadan ah, si uu u hanuuniyo waxna u baro, kuwa jooga iyo kuwa imaanba.

Xaalkaasna waa Xaal weyn oo khayr ah Cidduu doono yuuna siiyaa, illeen waa deeq badanee. Al-Jumucah (1-4).

5. Kuwii la faray inay Kitaabka Tawreed (ilaaliyaan) kuna Camal falaan (waa Yuhuudda) haddana aan ku camal falin, waxay la mid yihiin Dameer xambaarsan Kutub badan, waxaana xun masalka kuwaas beeniyey Aayadaha Eebe, Ilaahayna ma hanuuniyo kuwo daalimiin ah.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

بِسْمِ اللَّهِ مَافِي السَّمَوَاتِ وَمَافِي الْأَرْضِ الْمَلِكِ
الْقُدُّوسِ الْعَزِيزِ الْحَكِيمِ ﴿١﴾

هُوَ الَّذِي بَعَثَ فِي الْأُمَمِينَ رَسُولًا مِنْهُمْ بَيَّنَّ لَهُمْ
آيَاتِهِ وَوَضَعَهُمْ لِقَابِهِمْ وَالْحِكْمَةَ وَإِنْ
كَانُوا مِنْ قَبْلُ لَفِي ضَلَالٍ مُبِينٍ ﴿٢﴾

وَالْآخَرِينَ مِنْهُمْ لَمَّا يَلْحَقُوا بِهِمْ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿٣﴾

ذَلِكَ فَضْلُ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ
الْعَظِيمِ ﴿٤﴾

مَثَلُ الَّذِينَ حُمِّلُوا التَّوْرَةَ ثُمَّ لَا يُحْمِلُوهَا كَمَثَلِ
الْجَمَارِ يَتَحْمَلُ آسْفَارًا يُشْسُ مَثَلُ الْقَوْمِ الَّذِينَ
كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ
الظَّالِمِينَ ﴿٥﴾

6. Waxaad dhahdaa (Nabiga) kuwa Yuhuudda ahow haddaad sheegateen inaad tihiiin Awliyo Eebe dadka kale ka sokow, geeri jeclaada haddaad run sheegaysaan.

قُلْ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ هَادُوا إِنْ زَعَمْتُمْ أَنَّهُمْ آوَلِيَاءُ لِلَّهِ
مِنْ دُونِ النَّاسِ فَتَمَنَّوْا الْمَوْتَ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ ﴿٦﴾

7. Geerina ma jeclaanayaan weligood waxay hormarsadeen (oo gaf ah) dar-tiis, Eebana waa ogyahay kuwa daali-miinta ah.

وَلَا يَتَمَنَّوْنَهُ أَبَدًا بِمَا قَدَّمْتُمْ إِلَيْهِمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ
بِالظَّالِمِينَ ﴿٧﴾

8. Waxaad ku dhahdaa geerida aad ka cararaysaan way idinla kulmi, markaasaa laydiin celin Ilaah og waxa maqan iyo wax joogaba, markaasuu idiinka warrami (idinka jaasin) waxaad camal falayseen.

قُلْ إِنْ الْمَوْتَ الَّذِي تَفِرُّونَ مِنْهُ فَإِنَّهُ مُلَاقِيكُمْ
ثُمَّ تُرَدُّونَ إِلَىٰ عِلِّيِّ الْعَلِيِّ وَاللَّهِدَىٰ فَبَيْتِكُمْ
بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٨﴾

Waana in Quraanka lagu Camal falaa lana raaca, si aan loola mid noqonin Yuhuuddii dayacday Kitaabkii Tawreed, markaas Eebe ku maslay Dameer Kutub lagu raray, jeclaanshaha Ilaahayna wuxuu ku xidhan yahay sida loo caabudo iyo sida loo falo wuxuu ku faray ee ma aha sheegasho inuu ku jecel yahay sida Yuhuuddu fasho, saas daraaddeed waa in Eebe si dhab ah loo Caabudaa illeen isagaa loo noqone. Al-Jumucah (5-8).

9. Kuwa xaqa rumeeyow marka laysugu yeedho Salaadda Maalinta Jimcaha ah aada xusidda Eebe, wax gadashadana ka taga, saasaa idiin khayr roon had-daad tihiiin kuwo wax og.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا نُودِيَ لِلصَّلَاةِ مِنْ يَوْمِ الْجُمُعَةِ
فَاسْعَوْا إِلَىٰ ذِكْرِ اللَّهِ وَذَرُوا الْبَيْعَ ذَلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِنْ
كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٩﴾

10. Markase Salaadda la dhammeeyo Dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) khayrka Eebe, Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhawdhiin inaad liibaantaan.

فَإِذَا قُضِيَتِ الصَّلَاةُ فَانْتَشِرُوا فِي الْأَرْضِ
وَابْتَغُوا مِنْ فَضْلِ اللَّهِ وَاذْكُرُوا اللَّهَ كَبِيرًا
لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٠﴾


11. Markay arkaan tijaaro (Ganacsi) ama Ciyaar (wax lagu shuqloomo) way aadaan, waxayna kaa tagaan Nabiyo adoo taagan (Khudbo akhriin) waxaad dhahdaa waxa Eebe agtiisa ah yaa ka khayr badan Ciyaar iyo Ganacsiba, Ilaahay waa kan ugu khayr badan inta wax arsaaqda.

وَإِذَا رَأَوْا تِجَارَةً أَوْ لَهْوًا انفَضُّوا إِلَيْهَا وَتَرَكُوكَ قَائِمًا
قُلْ مَا عِنْدَ اللَّهِ خَيْرٌ مِنَ اللَّهِوِ مِنَ التِّجَارَةِ وَاللَّهُ
خَيْرُ الرَّازِقِينَ ﴿١١﴾

Salaaddu waa Tiirka Labaad ee Diinta Islaamka, dadaalkeeduna waa Waajib Culus ama tan Jumcada ha ahaato ruuxay ku waajibtay ama tan kalee Caadiga ah ha noqotee, waana inaan laga shuqloomin

mar hadduu waqtigeedu galo, iyadoo waajib tahay in shaqada iyo kasabka Xalaasha ah lagu dadaalo, Aayadda kow iyo Tobnaadna waxay ku soo degtay mar Nabigu (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Eebe ha yeelee) uu khudbo Jimco akhrinaayey oo Safar badeeca wada soo galay Madiino, markaas dad Asxaabtii ka mid ah aadeen, sida Eebe sheegay khayrka agtiisa ah yaa ka wanaagsan Ciyaar iyo Ganasciba.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Ruuxii hadla Maalinta Jumcada Imaamkoo Khudbada akhriin wuxuu la mid yahay Dameer Kutub xambaarsan. Ruuxii ku dhaha aamusna Jumco uma jirto. waxaa wariyey Imaam Axmad. Al-Jumucuh (9-11).



Suurat Al-Munaafiqun

سُورَةُ الْمُنَافِقِينَ

Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Markay kuu yimaadaan (Nabiyow) munaafiqiintu waxay dhihi waxaan marag ka nahay inaad tahay Rasuul Eebe, Ilaahayna waa ogyahay inaad tahay rasuulkiisii, Eebana wuxuu marag ka yahay inay Munaafiqiintu beenaalayaal yihiin (xagga niyada).

إِذَا جَاءَكَ الْمُنَافِقُونَ قَالُوا نَشْهَدُ إِنَّكَ لَرَسُولُ اللَّهِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ إِنَّكَ لَرَسُولُهُ وَاللَّهُ يَشْهَدُ إِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَكَاذِبُونَ ﴿١﴾

2. Dhaartooda (beenta ah) yey ka dhigteen gaashaan, dadkana waxay ka iileen Jidkii Eebe, waxay samaynaa aad buu u xunyahay.

أَتَّخَذُوا أَيْمَانَهُمْ جُنَّةً فَصَدُّوا عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ إِنَّهُمْ سَاءَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٢﴾

3. Saas waxaa ugu wacan inay (xagga muuqa) rumeeyeen haddana (hoosta) ka gaaloobeen, Quluubtoodana waa la daabacay (la daboolay) wax xaq ahna ma kasayaan.

ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ آمَنُوا ثُمَّ كَفَرُوا فَطُبِعَ عَلَى قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٣﴾

4. Haddaad aragto Munaafiqiinta waad la yaabi Jidhkooda, muuqooda, hadday hadlaanna waad dhagaysan hadalkooda, waxaadse mooddaa dogobyoo la tiirtiiriyeey, qayladii yeedhabana way ka cabsadaan, waa Col kuwaasi, Eebena ha lacnado ee xaggee loo duufsan.

* وَإِذَا رَأَيْتَهُمْ تُعْجِبُكَ أَجْسَامُهُمْ وَإِنْ يَقُولُوا تَسْمَعُ لِقَوْلِهِمْ كَأَنَّهِمْ خَشَبٌ مُسْتَنْدَبٌ يَخْسِبُونَ كُلَّ صَيْحَةٍ عَلَيْهِمْ هُمْ أَعْدَاؤُكُمْ فَاحْذَرُوهُمْ فَمَا تَعْلَمُ لَهُمْ لُجُومًا ﴿٤﴾

Suuraddani waxay ka sheekayn Munaafiqiinta iyo Xumaatadooda, maxaa yeelan xagga muuqaalka waxay sheegan inay xaqa rumeeyeen, xagga hoosana waxay Islaamka ula joogaa Colnimo iyo xumaan, kuwaasi waa ahlu Naaree yeyna kugu khaldin bidhaanta iyo Afka macaan ee suntu ka hoosayso. Al-Munaafiqun (1-4).

5. Marka lagu dhaho Munaafiqiinta kaalaya ha idiin dambi dhaaf weydiiye Rasuulka Eebe waxay ruxaan Madaxa

وَإِذَا قِيلَ لَهُم تَعَالَوْا يَسْتَعِزُّوا بِكَرْسِيِّ رَسُولِ اللَّهِ لَوْ وَرَاءَهُمْ وَرَأَيْتَهُمْ يَصُدُّونَ

(diiddo darteed) waxaad aragtaa iyagoo jeedsan oo iskibrin.

وَهُمْ مُسْتَكْبِرُونَ ﴿٥﴾

6. Waa isku mid haddaad u dambi dhaaf weydiisid (Nabiyow) iyo haddii kale, marnaba Eebe u dambi dhaafi mahayo, maxaa yeelay Eebe ma hanuuniyo dad Faasiqiin ah.

سَوَاءٌ عَلَيْهِمْ أَسْتَغْفَرْتَ لَهُمْ أَمْ لَمْ تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ
لَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ
الْفَاسِقِينَ ﴿٥﴾

7. Waa kuwa dhihi (Munaafiqiintu) ha quudininna kuwa Rasuulka la jooga intay ka kala tagaan, Eebaa iska leh khasnadaha Samaawaatka iyo Dhulka, hase yeeshee Munaafiqiintu ma fahansana.

هُمُ الَّذِينَ يَقُولُونَ لَا تُنْفِقُوا عَلَيَّ مِنْ عِنْدَ رَسُولِ
اللَّهِ حَتَّىٰ يَنْقَضُوا وَيَلَّهِ خِزْيَانُ السَّمَاوَاتِ
وَالْأَرْضِ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٧﴾

8. Munaafiqiintu waa kuwa dhihi haddaan Madiino u noqonno waa in kuwa tabarta lihi ka bixiyaan Magaalada kuwa dullaysan, tabar iyo Sharaf Eebaa iska leh Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta, hase yeeshee Munaafiqiintu ma oga.

يَقُولُونَ لَيْنَ رَجَعْنَا إِلَى الْمَدِينَةِ لِيُخْرِجَنَا
الْأَعْرَابُ مِنْهَا الْأَذَلَّ وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ
وَالْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٨﴾

9. Kuwa xaqa rumeeyow yaanay idin ka shuqlinin Xoolihiinnu iyo Caruurtiinnu xuska Eebe (daacaddiisa) Ciddii saas fashaana waa mid khasaartay.

يَأَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تُؤَلَّفُكُمْ أَمْوَالُهُمْ وَلَا
أَوْلَادُهُمْ عَنْ زِكْرِ اللَّهِ وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ
فَأُولَئِكَ هُمُ الْخَالِسُونَ ﴿٩﴾

10. Bixiyana wax ka mid ah waxa Eebe idinku arsuqay geerida horteeda oo markaas uu yiraahdo (ruuxaan wax baxsan) Eebow maad muddo dhow dib ii dhigtid oon sadaqaysto kuwa suubanna aan ka mid noqdee.

وَأَنْفِقُوا مِنْ مَّا رَزَقْنَاكُمْ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَ أَحَدَكُمُ
الْمَوْتُ يَقُولُ رَبِّ لَوْلَا أَخَّرْتَنِي إِلَىٰ أَجَلٍ قَرِيبٍ
فَأَصَدَّقَ وَأَكُن مِّنَ الصَّالِحِينَ ﴿١٠﴾

11. Naf malaggeed galayna Eebe dib uma dhigo, Ilaahayna waa ogyahay waxaad Camal falaysaan.

وَلَنْ يُؤَخِّرَ اللَّهُ نَفْسًا إِذَا جَاءَ أَجَلُهَا وَاللَّهُ
خَبِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١١﴾

Isla waynidu waa xuntahay, mana aha in ruux Caqli lihi diido in wanaagga loogu yeedho, hase yeeshee arrinta Ilaahay baa maamula risqigana isagaa bixiya ee ma aha siday Munaafiqiintu moodeen, tan kale waa inaan Xoolaha iyo Carruurto sabab u noqonnin Eebe ka fogaansho, illeen waa khasaare saasiye, waana in wax la baxsadaa geeri ka hor sidadka suubban looga mid noqdo oon hadhowna loo calaalalin, illeen naf malaggeed galay Eebe ma sugde.

Ibnu Cabbas wuxuu yidhi: Ruuxii leh Xoola gaadhsiya Xajka Baydka Eebe ama Zako ku waajibto falin wuxuu Eebe warsan markuu dhiman in loo celiyo adduunkii. Al-Munaafiqun (5-11).

Suurat At-Taghaabun



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa Eebe nasaha (weyneeya) waxa Samaawaatka (Cirka) iyo Dhulka ku sugan awood iyo mahadbana Eebaa iska leh, wax walbana isagaa kara.

يَسْبِغُ لَكُمْ مَاءَ السَّمَوَاتِ وَمَاءَ الْأَرْضِ لَعَلَّكُمْ تَكُونُونَ
وَلَهُ الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١﴾

2. Eebe waa kan idin abuuray qaarkiinna gaaluu noqday, qaarkiinna Mu'miiniin, Eebana waxaad Camal falaysan waa arkaa.

هُوَ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ فَمِمَّا تَبْتَلُونَ ﴿٢﴾

3. Samaawaatka (Cirka) iyo Dhulkaba wuxuu Eebe u abuuray si xaq ah, wuuna idin sawiray Eebe, dadoow suuraddiinnana wuu wanaajiyey, isagaana loo noqon (Aakhiro).

خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ وَصَوَّرَكُمْ فَأَحْسَنَ
صُورَكُمْ وَإِلَيْهِ الْمَصِيرُ ﴿٣﴾

4. Wuxuu ogyahay waxa samaawaatka (Cirka) iyo Dhulka ku sugan, wuxuuna ogyahay waxaad qarinqaysan iyo waxaad muujinaysan, Eebana waa ogyahay waxa laabta (Qalbiga) ku jira.

يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَيَعْلَمُ مَا تُبَيِّرُونَ
وَمَا تُخْفُونَ ﴿٤﴾ وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿٤﴾

Eebe waxaa u khushuuca una hoggaansama awooddiisa waxa ku sugan Cirka iyo Dhulka sida Aayado badan sheegeen, isagaana mahad iyo qudradba iska leh, Bani Aadamkana isagaa abuuray Jidkana tusiyey samaan iyo xumaanba, abuurka Eebana Ciyaar ma aha ee waa xigmo iyo Imtixaan, waxa dadku Camal falana waa ogyahay dhamaantiis, saas daraaddeed waa in niyada iyo qalbigaba la daahiriyo, Eebana la weeyneeyo illeen isagaa awood leh loona noqone. At-Taghaabun (1-4).

5. Miyuuna idin soo gaarin warkii kuwii gaaloobay ee horreeyey, waxay dhadhamiyeen xumaantii camalkoodii, waaxaana u sugnaaday caddibaad daran.

أَلَمْ يَأْتِكُمْ نَبَأُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَبْلُ فَذَاقُوا وَبَالَ أَمْرِهِمْ
وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٥﴾

6. Arrintaas waxaa ugu wacan in Rasuullo ula yimaadeen xujooyin ayna dheheen (Gaaladii) ma dadbaa na

ذَلِكَ بِأَنَّهُ كَانَتْ تَأْيِيهِمْ رُسُلَهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ فَقَالُوا
أَبَشْرٌ نَهَدُوكُمْ لَهَا فَكَفَرُوا وَتَوَلَّوْا وَأَسْتَفْتَى اللَّهُ

hanuunin ayna gaaloobeen oo jeedsadeen, iskana deeqtoonaysiiyeen (weynaysiiyeen) Eebe, Eebana waa midka hodanka ah lana mahadiyo.

وَاللَّهُ عَنِّي حَمِيدٌ ﴿٦١﴾

7. Waxay sheegeen kuwii gaaloobay inaan la soo bixinaynin, waxaad dhahdaa saas ma aha, Eebaa wuxuu ku dhaartay in la idin soo bixin laydinkana warrami waxaad camal fasheen, taasina waa u fududdahay Eebe.

زَعَمَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَنْ لَنْ يُبْعَثُوا قُلْ لِيَكُنْ لِزَعَمِكُمْ نَبَأٌ لَّيْسَ بِشَيْءٍ عِندَ رَبِّكَ فَاعْلَمُوا ﴿٦٢﴾

8. Ee rumeeya Eebe iyo Rasuulkiisa iyo nuurka Eebe soo dejiyey (Quraanka) Eebana waxaad camal falaysaan waa ogyahay.

فَاعْمَلُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَالنُّورَ الَّذِي أَنْزَلْنَا وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٦٣﴾

9. Maalinta qiyaamada ee Ilaahay idin soo kulmin waa maalin kado, ruuxiise Ilaah rumeeya camal wanaagsanna fala Eebe xumaantiisa (dambigiisa) wuu asturi, wuxuuna galin Jannooyin ay dhex dureeraan Wabiyaal way kuna waaraan waligood, taasina waa liibaan weyn.

يَوْمَ يَجْمَعُ كُلُّ لُؤْلُؤٍ لُؤْلُؤًا ذَلِكَ يَوْمُ التَّعَانِينِ وَمَنْ يُؤْمِنْ بِاللَّهِ وَيَعْمَلْ صَالِحًا كَفَّرَ عَنْهُ سَيِّئَاتِهِ وَيُدْخِلْهُ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا ذَلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ ﴿٦٤﴾

10. kuwa gaaloobayse beeniyeena Aayaadka Eebe waa kuwa Ahlu Naar ah waxayna ku waari dhexdeeda, meel loo ahaadana iyadaa u xun.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا أُولَٰئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ خَالِدِينَ فِيهَا وَبِئْسَ الْمَصِيرُ ﴿٦٥﴾

Warkii Ummaddii hore waxaa looga danleeyahay in lagu waano qaato lagana leexo Jidkoodii xumaa ee xaq diidka iyo Madax adayga ahaa, lana rumeeyo quraanka Nuurka Eebe ah iyo xaqoo dhan si Eebe Maalinta qiyaame ee kulminta naxariis iyo Jannooyin inoo siiyo loona gaadho liibaan Eebe, lagana nabad galo naar daran oo loo darbay xaq diidayaasha.

Muqaatilna wuxuu yidhi: Majiro khasaare ka weyn in kuwaasina Jannada galaan kuwaasina lalo aado Naarta. At-Taghaabun (5-10).

11. Wixii Musiiba ah (dhib ah) oo dhaca waa idinka Eebe, ruuxiise Eebe rumeeya waxaa Alle hanuunin (oo xasilin) qalbigiisa, Eebana wax walba waa ogyahay.

مَا أَصَابَ مِنْ مُصِيبَةٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ وَمَنْ يُؤْمِنْ بِاللَّهِ يَهْدِ اللَّهُ قَلْبَهُ، وَاللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿٦٦﴾

12. Eebe adeeca Rasuulkiisana adeeca, haddaadse jeedsataan (xaqa diidaan)

وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ فَإِن تَوَلَّيْتُمْ

waxaa Rasuulka saaran uun inuu si cad wax u gaarsiyo.

فَانْمَا عَلَى رَسُولِنَا الْبَلْغِ الْمُبِينِ ﴿١٢﴾

13. Alle, Allaah mooyee macbuud kaloo xaq Lugu caabudo ma jiro isaga uunna ha tala saarteen Mu'miniintu.

اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴿١٣﴾

14. Kuwa xaqa rumeeyow Haweenkiinna iyo Caruurtiina waxaa ka mid ah kuwo Col idiin ah ee ka digtoonaada, haddaadse iska cafidaan saamaxdaanna Eebe waa dambi dhaafe naxariiste ah.

يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا مِنْ أَزْوَاجِكُمْ وَأَوْلَادِكُمْ يَعْتَدُونَ لَكُمْ فَأَخَذُوا هُمُ وَإِنْ تَعَفَّوْا وَتَصَفَّحُوا وَتَغْفِرُوا فَإِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١٤﴾

15. Xoolihiinnu iyo Caruurtiinnu waa uun fidno (ibtilo) Eebe agtiisaase ajir weyn (ku sugan yahay).

إِنَّمَا أَمْوَالَكُمُ وَأَوْلَادُكُمُ فِتْنَةٌ وَاللَّهُ عِنْدَهُ أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿١٥﴾

Wax walba idinka Allaah yuu ku dhacaa, ruuxiise Eebe rumeeya waxaa hanuuni oo toosi xasilina Qalbigiisa, saas daraaddeed waa in Eebe iyo Rasuulkiisa Muxamad ah (naxariis iyo nabad gelyo Eebe korkiisa ha yeelee) la adeeco waana in Eebe lagu xidhnaado lana tala saarto wax kastoo xaqa kaa leexin ama kaa shuqlinna laga digtoonaado, maxaa yeelay Eebaa wax loo dhawaada ah.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Ilmuhu waa midhaha qalbiga, wayna ku fulayeyaan, kuna Bakhaylsiyaan, kuna walbahaariyaan. At-Taghaabun (11-15).

16. Eebe ka dhawrsada intaad kartaan, maqla oo adeecana (weyneeya), waxna baxsada, ruuxii laga dhawro bakhaylnimada naftiisa waa liibaanay.

فَاتَّقُوا اللَّهَ مَا اسْتَطَعْتُمْ وَأَسْمِعُوا وَأَطِيعُوا وَأَنْفِقُوا خَيْرًا لَأَنْفُسِكُمْ وَمَنْ يُوقِ شُحَّ نَفْسِهِ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿١٦﴾

17. haddaad Eebe amaah fiican amaah-sataan (wax sadaqaysataan) Eebe waa idiin laab laabi, dambigiinnana wuu dhaafi, Eebana waa kan la mahadiyo ee dusha san.

إِنْ تَقْرَبُوا اللَّهَ قَرَّبًا حَسَنًا يَضْعَفْهُ لَكُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ وَاللَّهُ شَكُورٌ حَلِيمٌ ﴿١٧﴾

18. waxa maqan iyo waxa joogaba Eebe waa ogyahay waana adkaade Falsan.

عَلِيمٌ الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١٨﴾

Diinta Islaamku ma aha wax lagu dhaqmi waayi oo adag, ee waa fududdahay, Eebana dadka wuxuu ka rabaa intay karaan uun inay ka yaabaan, waana in xaqa layska maqlaa layskuna adeecaa. waxna la baxsadaa bakhaylnimada iyo xoola jacaylka daranna laga fogaadaa, si Eebaha wax walba og inoogu abaal mariyo wanaag iyo khayr.

waxaa sugnaaday: Haddaan wax idin faro la imaada waxaad kartaan, haddaan idinka reebana ka reebtoonaada. Waa Saxiix. At-Taghaabun (16-18).

Suurat Adh-Dhalaq

سُورَةُ الطَّلَاقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Nabiyow haddaad haweenka furaysaan Ciddada ku fura (daahir aan la taaban) Ciddadana tiriya, Eebana ka dhawrsada, hana ka bixinnina Guryahooda (ay joogeen marka la furayey) iyana yeyna ka bixin (yeyan ka tagin) inay xumaan cad la yimaadaan mooyee, taasi waa xuduuddii Eebe, ruuxii ka tallaaba xuduudda Eebena naftiisuu dulmiyey, ma ogidin, wuxuu Eebe u dhawyahay inuu ka dib xaal keeno, (jacayl, isku noqosho).

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ إِذَا طَلَّقْتُمُ النِّسَاءَ فَطَلِّقُوهُنَّ لِعَدَّتِهِنَّ وَأَحْصُوا الْعِدَّةَ وَاتَّقُوا اللَّهَ رَبَّكُمْ لَا تَخْرُجُوهُنَّ مِنْ بُيُوتِهِنَّ وَلَا يَخْرُجْنَ إِلَّا أَنْ يَأْتِيَنَّ بِفَحِشَةٍ مُّبِينَةٍ وَفِيكَ حُدُودُ اللَّهِ وَمَنْ يَتَعَدَّ حُدُودَ اللَّهِ فَقَدْ ظَلَمَ نَفْسَهُ لَا تَدْرِي لَعَلَّ اللَّهَ يُحْدِثُ بَعْدَ ذَلِكَ أَمْرًا ﴿١﴾

2. Markay Ciddada dhammaadkeeda (ku dhawaadaan) si fiican u haysta, ama si fiican u faaruqa, dad caadiliina oo idin ka mid ahna marag uga dhiga, maraggana ha u guteen Eebe dartiis, xaalkaasi waa wacdi ruuxii rumayn Eebe iyo Maalintii dambaysay «qiyaa-mada» ruuxii Eebe ka dhawrsadana wuxuu u furi faraj.

فَإِذَا بَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَأَمْسِكُوهُنَّ بِمَعْرُوفٍ أَوْ فَارِقُوهُنَّ بِمَعْرُوفٍ وَأَشْهُدُوا ذُوَى عَدْلِ مِمَّنْ تَقْبَلُونَ الشَّهَادَةَ لِلَّهِ ذَلِكَ لَكُمْ بَعْضُ مَا يَلْزَمُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمُ الْآخِرُ وَمَنْ يَتَّقِ اللَّهَ يَجْعَلْ لَهُ مَخْرَجًا ﴿٢﴾

3. Wuxuuna ka irsaaqi meel uusan ka filanayn, ruuxii Eebe tala saartana waa ku filan yahay, Eebana amarkiisu waa fuli, (waxna kama fakado) wax walbana Eebe wuxuu u yeelay waqti sugin (oo go'an).

وَيَرْزُقَهُ مِنْ حَيْثُ لَا يَحْتَسِبُ وَمَنْ يَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ فَهُوَ حَسْبُهُ إِنَّ اللَّهَ بِنِيعَةِ أَمْرِهِ قَدِيرٌ فَجَعَلَ اللَّهُ لِكُلِّ شَيْءٍ قَدْرًا ﴿٣﴾

Isfuriddu waa xaal Diinta Islaamku ayan jeclayn, maxaa yeelay waxaa ku dumi guri iyo qoys, hase yeeshee markay lagama maarmaan noqoto waa bannaan tahay, waase inaan lagu xadgudbin haweynayda la furi, waqti fiicana la furaa gurigana laga saarin intay ciddada ku jirto, waxaaba laga yaa - baa inay isku noqdaan, waana in wannag lagu wada noolaado, ama wanaag loo kala tago, Eebana laga yaabo, Taladana loo dhiibto illeen wax walba isagaa awoodee si uu faraj inoogu furo. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Ruuxii badiya Dambi dhaaf

warsi wuxuu uga yeelaa Eebe murug walba faraj, Cidhiidhi walbana ka bixid, wuxuuna ka arzaaqaq Meeluusan ka filayn.

Waxaa wariyey Imaam Axmed. Adh-Dhalaq (1-3).

4. Haweenkiinna Caadada ka quustay haddaad shakidaan Ciddadoodu waa seddex bilood, kuwaan Caada lahayn waa sidaas oo kale, Haweenka uurka leh ciddadoodu waa inay umulaan (dhalaan), ruuxii Eebe ka dhawrsadana wuxuu u fududayn amarkiisa.

وَالَّتِي يَبْسِنَ مِنَ الْمَحِيضِ مِنْ نِسَائِكُمْ إِنِ
أَرْبَعَةَ فَعَدْتُهُنَّ ثَلَاثَةَ أَشْهُرٍ وَالَّتِي تَمْحِضُ
وَأُولَاتُ الْأَحْمَالِ أَجْأَهُنَّ أَنْ يَضَعْنَ حَمْلَهُنَّ
وَمَنْ يَتَّقِ اللَّهَ يَجْعَلْ لَهُ مِنْ أَمْرِهِ يُسْرًا ﴿٤﴾

5. Kaasi waa amarkii Eebe uu idiin soo dejiyey, ruuxii Eebe ka dhawrsadana xumaantiisuu asturaa ajirkiisana wuu weyneeyaa.

ذَلِكَ أَمْرُ اللَّهِ أَنْزَلَهُ إِلَيْكُمْ وَمَنْ يَتَّقِ اللَّهَ يُكَفِّرْ
عَنْهُ سَيِّئَاتِهِ وَيُعْظِمْ لَهُ أَجْرًا ﴿٥﴾

6. dejiya Haweenkaas (ciddada ku jira) meelahaad daggan tihii eed heli kartaan, hana dhibina si aad u cirriiridaan, hadday uur leeyihiinna nafaqeyya (masruufa) intay ka umulaan (ka dhalaan), hadday ilmaha nuujiyaanna siiya ujuuro, wanaagna is fara, haddii laysku qabto nuujintana mid kale ayaa unuujin.

أَسْكُوهُنَّ مِنْ حَيْثُ سَكْنُوهُنَّ وَلَا تَضَارُوهُنَّ
لِيَضْمُوا عَلَيْهِنَّ وَلَوْ كُنَّ أُولَاتٍ حَمِلْنَ فَأَنْفِقُوا عَلَيْهِنَّ حَتَّى
يَضَعْنَ حَمْلَهُنَّ فَإِنْ أَرْضَعْنَ لَكُمْ فَارْتُواهُنَّ أَجْرَهُنَّ
وَأَنْجِرُوا بَيْنَكُمْ بِمَعْرُوفٍ وَإِنْ تَعَاَسَرْتُم فَاسْتَرْضِعْ لَهُ
أُخْرَى ﴿٦﴾

7. Ha ka nafaqeyyo (masruufo) midka awood xoola leh awooddiisa, kan wax yarna ha ka nafaqeyyo waxa Eebe siiyey (ee uu karo), Eebana kuma mashaqeyyo naf wuxuusan siinnin, Eebana wuxuu yeeli cidhiidhi dabadiis fudayd (faraj).

لِيُنْفِقُوا ذُرِّيَّتَهُمْ مِنْ سَعْيِهِمْ وَمَنْ قَدَّرَ عَلَيْهِ رِزْقَهُ فَلْيُنْفِقْ
وَمَاءَ أُمَّةٍ أَلَّهَ لَا يَكْفُلُ اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا مَاءَ أُمَّتِهَا
سَيَجْعَلُ اللَّهُ بَعْدَ عُسْرٍ يُسْرًا ﴿٧﴾

Diintu waxay u timid inay dadka u caddayso Arrimahooda, saas daraaddeed aayadahanu waxay ka warrami ciddada Haweenka la furo, taas oo ah in haweenayda aan caada lahayn ay saddax Bilood tirsan tan uurka lehna markay umusho, xaalkaasna waa arrin Eebe soo dejiyey, tan kale waa in hooy loo yeelaa intay ciddada ku jirto, lana masruufo, ruux walbana awooddiisa uu ka masruufo, illeen Eebe dadka kuma kallifo (mashaqeyyo) waxayna awoodine, Ciddii Ilaahay ka yaabta kuna xidhnaatana Eebe faraj yuu u furi xaalkiisana wuu fududayn.

waxaana soo sheegnay in Cidhiidhi kasta Eebe ka yeelo faraj sida Imaam Axmed wariyey. Adh-Dhalaq (4-7).

8. Maxay badan tahay Magaalo Caasiday amarka Eebe iyo Rusushiisa, markaas Eebe xisaabay xisaab daran caddibaad adagna caddibay.

وَكَايْنِ مِنْ قَرِيْبٍ عَتَّتَ عَنْ أَمْرِهَا وَرُسُلِهِ فَاسْتَبْهَا
حِسَابًا شَدِيدًا وَعَدَّ بِهَا عَدَابًا كَثْرًا ﴿٨﴾

9. oo dhadhamisay cidhibtii xaalkaa xumaantiisa, cidhibteediina ku dambaysay khasaare.

فَدَاقَتْ وَبَالَ أَمْرِهَا وَكَانَ عَقِبَهُ أَمْرُهَا حُسْرًا ﴿٩﴾

10. Eebe wuxuu u darbay kuwaas Caddibaad daran, ee Eebe ka dhawrsada kuwa Caqliga lahaw rumeeyeyowna, Ilaahay wuxuu idiin soo dejiyey Qu-raane.

أَعَدَّ اللَّهُ لَهُمْ عَذَابًا شَدِيدًا فَاتَّقُوا اللَّهَ يَا أُولِي الْأَلْبَابِ الَّذِينَ ءَامَنُوا قَدْ أَنْزَلَ اللَّهُ إِلَيْكُمْ ذِكْرًا ﴿١٠﴾

11. Rasuulna wuu idiin soo diray kaasoo idiin akhriya Aayaadka Eebe ee cad cad si uu kuwa Mu'miniinta ah camal wanaagsanna falay uga bixiyo mugdiga Nuurkana ugu bixiyo, ruuxii Eebe rumeeya camal wanaagsanna fala wuxuu gelin Jannooyin ay dureerayso dhexdeeda Wabiyaal wayna ku waari waligood, Eebe waa wanaajiyey kuwaas risqigooda.

رَسُولًا يَتْلُو عَلَيْكُمْ آيَاتِ اللَّهِ مُبَيِّنَاتٍ لِيُخْرِجَ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَيَعْمَلُوا الصَّالِحَاتِ مِنَ الظَّلَمَاتِ إِلَى التَّوْبَةِ وَمَنْ يُؤْمِنْ بِاللَّهِ وَيَعْمَلْ صَالِحًا يُدْخِلْهُ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا قَدْ أَحْسَنَ اللَّهُ لَهُ رِزْقًا ﴿١١﴾

12. Eebe waa kan abuuray Toddobo Samo Dhulkana kala mid dhigay, amarka Eebena wuxuu ku soo degaa dhexdooda, si aad u ogaataan in Eebe wax walba karo wax walbana koobay.

اللَّهُ الَّذِي خَلَقَ سَبْعَ سَمَاوَاتٍ وَمِنَ الْأَرْضِ مِثْلَهُنَّ يَتَنَزَّلُ الْأَمْرُ بَيْنَهُنَّ لِتَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ وَأَنَّ اللَّهَ قَدْ أَحَاطَ بِكُلِّ شَيْءٍ عِلْمًا ﴿١٢﴾

Kibir iyo isla weynaan, madax adayg iyo xaqoo laga horjeedsado waxay cidhibtiisu noqotaa halaag iyo caddibaad daran, siday la kulmeen Gaaladii saas falay ee horreeyey, hasey eeshee dadka xaqa rumeeyey ee Caqliga leh waa inay aad ugu waana qaataan kuwaas, Eebana ka dhawsadaan, illeen waa ka quraanka u soo dejiyey, Rasuulna u soo direy, mugdigana ka saaray, nuurna u bixiye, si markaas wannag iyo Janno loogu abaal mariyo, maxaa yeelay Eebe waa kan awoodda leh, wax walbana abuuray wax walbana Cilmigiisu koobay.

Ruuxii dulmiya taako Dhul ah waxaa Madaxa loo galiyaa Toddobada Dhul. Waa Saxiix. Adh-Dhalaq (8-12).



Suurat At-Taxriim



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Nibiyow maxaad u xarrimi wax Eebe kuu xalaaleeyey si aad u raalli geliso Haweenkaaga, Eebe waa dambi dhaafay naxariista ah.

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ لِمَ تُحَرِّمُ مَا أَحَلَّ اللَّهُ لَكَ تَتَّبِعِي مَرْضَاتِ أَزْوَاجِكَ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿١﴾

2. Eebe waa idiin caddeeyey waxa dhaartiinnu ku xalaaloobi, Eebena waa gargaarihiinna, waana wax walba oge falsan.

فَدَقَرَضَ اللَّهُ لَكُمْ تَحِلَّةَ أَيْمَانِكُمْ وَاللَّهُ مَوْلَاكُمْ وَهُوَ الْعَلِيمُ الْحَكِيمُ ﴿٢﴾

3. Ma xusuusan Waqtigii Nabigu ku qarsaday Haweenkiisa Qaarkood hadal, markaas ay ka warrantay xaalkii, Eebana uu Nabiga u daahiriyyey, markaas Nabigu uu ogeysiyyey qaarkiis (haweenaydii) qaarna uu ka dhaafay, markuu u warramay ay tiri yaa kuu sheegay xaalkan kuna yiri: waxaa ii warramay Eebaha wax walba oge ah ee yaqaana.

وَإِذْ أَسْرَأْتَنِي إِلَىٰ بَعْضِ أَزْوَاجِهِ حَدِيثًا فَلَمَّا نَبَأْتَ بِهِ وَأَظْهَرَهُ اللَّهُ عَلَيْهِ عَرَفَ بَعْضَهُ وَأَعْرَضَ عَنْ بَعْضٍ فَلَمَّا نَبَأَهَا بِهِ قَالَتْ مَنْ أَنْبَأَكَ هَذَا قَالَ نَبَأَنِيَ الْعَالِمُ الْخَيْرُ ﴿٣﴾

4. Haddaad Eebe u noqotaan, in kastoo qalbigiinnu iishay (Eebe wuu idiin dhaafi) haddaadse isu kaalmaysataan Nabiga (dhibkiisa) waxaa u gargaari Eebe, Jibriil iyo kuwa suuban ee Mu'miniinta ah Mallaa'igta (kalana) markaas ka dib yey xoojin.

إِنْ تَوْبَا إِلَى اللَّهِ فَقَدْ صَغَتْ قُلُوبُكُمَا وَإِنْ تَظَاهَرَا عَلَيْهِ فَإِنَّ اللَّهَ هُوَ مَوْلَاهُ وَجِبْرِيلُ وَصَالِحُ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمَلَائِكَةُ بَعْدَ ذَلِكَ ظَهِيرٌ ﴿٤﴾

5. Wuxuu Eebe u dhaw yahay in Nabigu hadduu idin furo (Haweenka Nabiga qaarkood) idiinkaga beddalo kuwa idinka khayr roon oo ah Muslimiin, Mu'miniin ah, adeeca Eebe, Toobad keena, Eeba caabuda, Soomana, kuwa horay loo guursaday iyo kuwo aan hadda ka hor la guursanba leh.

عَسَىٰ رَبُّهُ إِنْ طَلَّقَكُنْ أَنْ يُبْدِلَهُ أَزْوَاجًا خَيْرًا مِنْكَ مُسْلِمَاتٍ مُؤْمِنَاتٍ قَانِتَاتٍ تَلْبَسْنَ عِلْدَانِ سَدِيدَاتٍ تَعْتَبُ وَتَأْكُرْنَ ﴿٥﴾

Ayadahanu waxay ku soo degeen mar uu Nabigu (naxariis iyo Nabad gelyo korkiis Eebe ha yeelee) Caano ama Malab uu ka soo dhadhamiyey Guri haweenaydiis, markaas uu kuwa kale qalbigoodu wax galay, Eebana isagaa wax Xalaaleeya waxna xarrima, saas daraadeed yuu nabiga ugu jeediyey arrintaas, tan kale waa inaan la isku kaalmaysan dhib iyo wax yeello ee laysu kaalmaystaa wanaag iyo sama fal, Eebana waa gargaaraha Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta. Masruuqna wuxuu yidhi: Nabiga waxaa la faray inuu Dhaartii ka kafaaroguto. At-Taxriim (1-5).

6. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra Naftiinna iyo ehelkiinna naar lagu shido dad iyo dhagax ay kana (sha-qeeyaan) malaa'ig adag oo daran oon Eebe ku caasiyeyn wuxuu faro, falana wixii la amro.

يَتَّابِعُهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا ءَأَنفُسُكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا
وَقَوْلُهَا النَّاسُ وَالْجِبَارَةُ عَلَيْهَا مَلَائِكَةٌ غِلَظٌ
شِدَادٌ لَا يَعْصُونَ اللَّهَ مَا أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ ﴿٥﴾

7. Kuwa Gaaloobow ha cudur daaran-nina maanta (Qiyaamada) waxaa lay-dinka abaal marin uun waxaad camal fali jirteen.

يَتَّابِعُهَا الَّذِينَ كَفَرُوا لَا تَعْتَدُوا الْيَوْمَ إِنَّمَا خِزْوَنٌ
مَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٦﴾

8. Kuwa xaqa rumeeyow u toobad keena Eebe toobad san, wuxuu Eebe u dhaw yahay inuu asturo xumaantiinna, idin geliyana Jannooyin ay dureerayso dhex-dooda Wabiyaal, Maalinta uusan Eebe hoojinayn Nabiga iyo kuwa la jooga, nuurkoodina wuxuu socon hortooda iyo midigtooda iyagoo dhihi Eebow noo taam yeel Nuurkannaga noona dambi dhaaf, adaa wax walba karee.

يَتَّابِعُهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا نُؤْتُوا إِلَى اللَّهِ تَوْبَةً نَّصُوحًا
عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَن يُكَفِّرَ عَنْكُمْ سَيِّئَاتِكُمْ
وَيُدْخِلَكُم مِّنْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ يُؤْمَرُونَ
لَا يَخْشَى اللَّهُ النَّبِيَّ وَالَّذِينَ ءَامَنُوا مَعَهُ، نُورُهُمْ
يَسْعَىٰ بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَبِأَيْمَانِهِمْ يَقُولُونَ رَبَّنَا
آتِنَا نُورَ نَارِنَا وَأَغْفِرْ لَنَا إِنَّكَ عَلَىٰ كُلِّ
شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٧﴾

9. Nabiyow la jihaad gaalada iyo Munaafiqiinta kuna adkow, hoygoodu-na waa Jahannamo, meel loo ahaadana iyadaa u xune.

يَتَّابِعُهَا النَّبِيُّ جِهَادًا وَالْمُنَافِقِينَ وَأَعْتَقُ
عَلَيْهِمْ وَمَأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ وَبِئْسَ الْمَصِيرُ ﴿٨﴾

Dadka xaqa rumeeyey waa inay Ehelkooda khayrka faraan si ay uga nabad galaan naar dadka iyo dhagaxa lagu huriyo, Malaa'ig daranna oo amraka Alle fulisana ay ka shaqayso, si ayna u noqonin sida kuwa xaq diidka ah ee loo dhihi ha cudur daaraninna maanta, waana in Eebe toobad dhab ah loogu toobad keeno si uu wanaag iyo dambi dhaaf noogu abaal mariyo maalinta Nabiga iyo intii raacday Eebe u sama fali illeen wax walba isagaa karee, Gaalada iyo Munaafiqiintana waa in lala jahaado si Jidka toosan loo tusiyo.

Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa Ha yeelee) waxaa la warsaday Tawbadda Nasuuxa ah (Toosan) wuxuuna yidhi: Waa in la qoomameeyo Dambiga Markuu kaa dhaco, ood markaas Eebe dambidhaaf warsato, oodan una noqonin. At-Taxriim (6-9).

10. Eebe wuxuu tusaale uga dhigay kuwa Gaaloobay Haweenaydii Nabi

صَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا لِلَّذِينَ كَفَرُوا امْرَأَتٌ زُوجٌ وَأَمْرَأَتٌ

Nuux iyo Nabi Luudh, waxaa qabay Laba Addoon oo Eebe oo suusuubban, markaasay khiyaameen Nabiyaadaas waxbana ugama ayan tarin Eebe agtiis waxaana loo dhihi Labadaas haweenay la gala naarta kuwa gelaya.

لُوطٌ كَانَ تَحْتَ عَبْدَيْنِ مِنْ عِبَادِنَا صَالِحِينَ
فَخَانَتَاهُمَا فَلَمْ يَغْنَيْنَا عَنْهُمَا مِنَ اللَّهِ شَيْئًا وَقِيلَ
أَدْخُلَا النَّارَ مَعَ الدَّٰخِلِينَ ﴿١٠﴾

11. Waxaa kale oo Eebe Tusaale uga dhigay kuwa rumeeyey Haweenaydii Fircoon markay tidhi Eebow Guri agtaada iiga dhis jannada dhexdeeda, igana nabad geli Fircoon iyo Camalkiisa, igana nabad geli dadkaas daalimiinta ah.


وَصَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا لِلَّذِينَ ءَامَنُوا امْرَأَتَ
فِرْعَوْنَ إِذْ قَالَتْ رَبِّ ائْتِنِي بِثَمَانِي
الْجَنَّةِ وَتَجْنِي مِنَ فِرْعَوْنَ وَعَمَلِهِ وَتَجْنِي مِنَ
الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿١١﴾

12. Maryama binti cimraanna xusuusta ee isdhawrtay, markaas malaggu jeebka ka afuufay, rumaysayna Sharciga Eebe iyo Kutubtiisaba, kana mid noqotay kuwa Eebe adeeca.

وَمَرْيَمَ ابْنَتَ عِمْرَانَ الَّتِي أَحْصَتَ فَرْجَهَا
فَنَفَخْنَا فِيهِ مِنْ رُوحِنَا وَصَدَّقَتْ بِكَلِمَاتِ رَبِّهَا
وَكُنتُ مِنْ الْقَدِيبَتِينَ ﴿١٢﴾

Ruux xumaanlaw ah wax uma tarto la nooli dad fiican hadduusan wax qaadanaynin, sida haweenkii Nabi Nuux iyo Nabi Luudh iyo wixii la mid ahaa.

Sidoo kale ruxii wanaagsan xumaan qof kale wax ma yeesho hadduusan ka raalli ahayn sida haweenaydii fircoon, Maryama Bintu Cimraan oo Nabi Ciise Hooyadiis ahayd Xaalkeeduna la yaabuu lahaa waxayse ku tusin in Eebaha Bini aadamka abuuray uu siduu rabo wax u falo saasna waa in la rumeeyo. Nabiguna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxaa kaamil noqday Ragga waxbadan, Hawense waxaa ka kaamil noqday Aasiyadii Fircoon, Maryama Bintu Cimraan, iyo Khadiijo Bintu khuweylid, Fadliga Caa'isho ee Haweenkana waa sida thariidka iyo cunnada kale. (Bukhaari iyo Muslim). At-Taxriim (10-12).



Suurat Al-Mulk

سُورَةُ الْمُلْكِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa barako badnaaday (oo weynaaday) Eebaha Xukunku awooddiisa ku jiro ee wax walbana kara.

تَبَرَّكَ الَّذِي بِيَدِهِ الْمُلْكُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١﴾

2. Eebaha abuuray geeri iyo nololba, si uu dadow idiin imtixaamo kiinna Camal fiican, Eebana waa adkaade dambidhaafe ah.

الَّذِي خَلَقَ الْمَوْتَ وَالْحَيَاةَ لِيَبْلُوَكُمْ أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا وَهُوَ الْعَزِيزُ الْعَلِيمُ ﴿٢﴾

3. Eebe waa midka abuuray Toddobo Samo oo isdul saaran kuna arki maysid abuurka Eebaha Raxmaanka ah kala tagsani, bal daymada celi inaad aragto wax dillaac ah.

الَّذِي خَلَقَ سَبْعَ سَمَاوَاتٍ طِبَاقًا تَرَى فِي خَلْقِ الرَّحْمَنِ مِنْ تَفَوُّتٍ فَارْجِعِ الْبَصَرَ هَلْ تَرَى مِنْ فُطُورٍ ﴿٣﴾

4. Haddana celi daymada waxaa kugu soo noqon aragga oo dhibban daallanna.

فَارْجِعِ الْبَصَرَ كَرَّتَيْنِ يَنْقَلِبْ إِلَيْكَ الْبَصَرُ حَاسِنًا وَهُوَ حَسِيدٌ ﴿٤﴾

5. Eebe wuxuu ku qurxiyey Samada dhow Nalal (Xiddigaha) wuxuuna ka dhigay Xiddigahaas kuwo lagu gano Shayaadiinta, Wuxuuna Eebe u diyaaariyay kuwaas Naarta Saciir.

وَلَقَدْ زَيَّنَّا السَّمَاءَ الدُّنْيَا بِمَصَابِيحَ وَجَعَلْنَاهَا رُجُومًا لِلشَّاطِطِينَ وَأَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابَ السَّعِيرِ ﴿٥﴾

Eebe khayrkiisu waa badan yahay wax walbana awooddiisay ku hoos jiraan wuxuu doonana wuu karaa, dadkana waxaa loo abuuray in la imtixaano kooda Camal Aakhiro iyo kan aduunkaba wanaajiyaa, Eebe abuuriddiisa uu Cirka abuurayna wax dhaliil ah loo heli maayo sida Khalqigiisa kalaba, Xiddigahana Eebaa abuuray iyagoo Nalal u ah Cirka' Shayaadiintana lagu eryo, Eebaha awooddaas leh waa in la Caabudo, Jidka uu farayna lagu soocdaa.

Rasuulkuna waxaa laga weriyay inuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe wuxuu ku dulleyey Baniid aadmaka Geeri, wuxuuna ka yeelay adduunka Guri nolol iyo Geeri, kana yeelay Aakhirana Guri abaalmarin iyo Waarid. Waxaa wariyey Ibnu Abii Xaatum. Al-Mulk (1-5).

6. Kuwa ka gaalobay Eebahood waxaa u sugnaaday Caddibaadda Jahan-namo, meel loo ahaadana iyadaa u xun.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا بِرَبِّهِمْ عَذَابُ جَهَنَّمَ وَسَاءَ الْمَصِيرُ ﴿٦﴾

7. Marka Gaalada lagu tuuro Naarta waxay ka maqli Cod xun oo daran iyadoo karaysa.

إِذَا الْفُؤَاءُ فِيهَا سَمِعُوا لَهَا شَهِيقًا وَهِيَ تَفُورُ ﴿٧﴾

8. waxay u dhawdahay inay Cadha daraaddeed la kala dillaacdo, marka Koox (Gaala ah) lagu ridaba waxaa warsada Malla'igta Naarta ka shaqeysa iyagoo ku dhihi miyuusan idiin imaanin wax idiin diga.

كَأَذِّمَيزُ مِنْ الْأَغْطِطِ كُلَّمَا أَلِيَّتْ فِيهَا فَوْجٌ سَأَلْتَهُمْ خَزَنَتَهُمَا
أَلَمْ يَأْتِكُمْ نَذِيرٌ ﴿٨﴾

9. Waxayna ugu jawaabi waa noo yimid wax noo diga waanse beeninay, annagoo leh ma soo dejinin Eebe waxba, idinkuna waxaad ku sugan tihiin baadi weyn.

قَالَ أُولَئِكَ قَدْ جَاءَنَا نَذِيرٌ فَكَذَّبْنَا وَقُلْنَا مَا نَزَّلَ اللَّهُ مِنْ
شَيْءٍ إِنْ أَنْتُمْ إِلَّا فِي ضَلَالٍ كَبِيرٍ ﴿٩﴾

10. Gaaladii waxay dhaheen haddaan wax maqlaynno ama aan wax kasayno Naarta Saciiro ehelkeeda ma aannaan noqonnen.

وَقَالُوا لَوْ كُنَّا نَسْمَعُ أَوْ نَعْقِلُ مَا كُنَّا فِي أَصْحَابِ السَّعِيرِ ﴿١٠﴾

11. Waxay qirteen (Gaaladu) dambi-goodii waxaana u sugnaatay fogaansho Naarta Saciiro ehelkeeda.

فَأَعْتَفُوا بِإِذْنِهِمْ فَمَا هُمْ بِحَقِّ لِأَصْحَابِ السَّعِيرِ ﴿١١﴾

Xaq diidayaashu waxay geli Naar daran oo karaysay qaylana leh, Malaa'igta si canaan iyo guulguul ah yey u warsataa in Rasuul u diga loo soo diray iyo in kale, iyaguna way qirtaan in Rasuul loo soo diray ayse beeniyeen xaqiina diideen, wayna calaacaleen iyagoo leh haddaan wax kasayno Naar ma aannan galleen, saas daraaddeed waa in Eebe laga yaabo laguna waano qaato Arrintaas. Waxaa sugnaaday: Dadka lama halaago intay Naftoodu ka garaabaan. Al-Mulk (6-11).

12. Kuwa Eebe ka yaaba iyagoon la arkaynin (Eebe mooyee) waxaa u sugnaaday dambi dhaaf iyo ajri weyn.

إِنَّ الَّذِينَ يَخْشَوْنَ رَبَّهُمْ بِالْغَيْبِ لَهُمْ مَغْفِرَةٌ
وَآجْرٌ كَبِيرٌ ﴿١٢﴾

13. Ama hadalka hoos u dhiga dadow ama kor u qaada Eebe waa ogyahay waxa laabta ku jira.

وَأَسِرُّوا قَوْلَكُمْ أَوِ اجْهَرُوا بِهِ إِنَّهُ عَلِيمٌ
بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿١٣﴾

14. Ma waxaan wax ogeyn Eebaha wax walba abuuray ee wax walba daalacan.

أَلَا يَعْلَمُ مَنْ خَلَقَ وَهُوَ اللَّطِيفُ الْخَبِيرُ ﴿١٤﴾

15. Eebe waa kan Dhulka ka dhigay mid laylyan ee ku socda Waddooyinkiiisa kana Cuna Quudkiisa Eebaana Dadka loo soo kulmin (Qiyaamada).

هُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ ذُلُولًا فَامْسُقُوا فِي مَنَاجِبِهَا وَكُلُوا
مِنْ رِزْقِهِ وَإِلَيْهِ النُّشُورُ ﴿١٥﴾

16. Miyaad ka aamin noqoteen Eebaha Sare inuu Dhulka idin la gooyo, ayna idinla dhaqdhaqaaqdo.

ءَأَمِنْتُمْ مَن فِي السَّمَاءِ أَن يَخْسِفَ بِكُمُ الْأَرْضَ
فَإِذَا هِيَ تَمُورُ ﴿١٦﴾

17. Miyaadse ka aamin noqoteen Eebaha Sare inuu Dhagaxyo Naar ah idinku soo daadiyo, waad ogaan doontaan digniinta Eebe Cidhibteeda.

أَمْ أَمِنْتُمْ مَن فِي السَّمَاءِ أَن يُرْسِلَ عَلَيْكُمْ حَاصِبًا
فَسَتَعْلَمُونَ كَيْفَ نَذِيرِ ﴿١٧﴾

18. Waxaa Eebe beeniyey Gaaladii (reer Makaad) ka horreeyey, sidayse ahayd Ciqaabti Eebe.

وَلَقَدْ كَذَّبَ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَكَيْفَ كَانَ نَكِيرِ ﴿١٨﴾

Dadka Eebe Dhabnima u rumeeyey way Caabudi kana dhoowrsan xumaanta iyagoon arkaynin ama dad ha la joogeen ama keli ha ahaadeene.

Eebana wuxuu ku abaal marin dambi dhaafkiisa, Eebaha wax walba og ee Dhulka layley ee Qiyaamada loo soo kulmi miyaa Ciqaabtiisa Cidna ka aamin noqon kartaa, dadka xun iyo Gaaladaba waxa u caada ah inay Eebe beeniyaan, waxaase ku dhici Ciqaabta Eebe, waxaana ka nabad geli ruuxii Waddada Eebe qaada.

Toddobada Eebe hadheeyo Maalinta Qiyaame waxaa ka mid ah kuwa Eebe kayaaba iyo kuwa Xusuusta iyagoo kali ah Indhahooduna Ilmeeyaan. (Waa Saxiix). Al-Mulk (12-18).

19. Miyeyna dadku arkaynin Shimbirka korkooda ah marna baalka fidin marna laabi wax haya oon Eebaha Raxmaan ahayna uusan jirin, Eebana wax walba wuu arkaa.

أَوَلَمْ يَرَوْا إِلَى الطَّيْرِ فَوْقَهُمْ صَفَائِبَ وَيَقْتَضْنَ
مَا يَمْسِكُهَا إِلَّا الرَّحْمَنُ إِنَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ بَصِيرٌ ﴿١٩﴾

20. Waa kuma Gargaaraha Eebaha Raxmaan ah ka soo hadhay ee u gaargaari Gaalada, Gaaladu waxay ku sagan yihiin kadsoomid.

أَمْ هَذَا الَّذِي هُوَ جُنْدٌ لَّكَ يَنْصُرُكَ مَن دُونِ الرَّحْمَنِ
إِنَّ الْكَافِرُونَ إِلَّا فِي غُرُورٍ ﴿٢٠﴾

21. Waa kuma kan wax quudiya haddii Eebe haysto Risqigiisa, Gaaladu waxay ku Madax adaygeen isla weyni iyo Xaq diidnimo.

أَمْ هَذَا الَّذِي يَزُفُّكَ إِنْ أَمْسَكَ رُزُقَهُ
بَلْ لَجُوا فِي غُرُورٍ وَهُمْ لَا يَسْقُونَ ﴿٢١﴾

22. Midkee wanaagsan Ruux Wajiga ku socda iyo mid si toosan oo siman Wadda Toosan ugu socda.

أَمْ يَرَى يَمْشِي مُكِبًّا عَلَى وَجْهِهِ أَهْدَىٰ أَمَّنْ يَمْشِي
سَوِيًّا عَلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٢٢﴾

23. Dheh Nabiyow Eebe waa midka Dadkow idin ahaysiyyey, Maqal iyo Arag iyo Caqlina idiin yeelay, wax yar baadse Eebe ku shukridaan.

قُلْ هُوَ الَّذِي أَنشَأَكُمْ وَجَعَلَ لَكُمُ السَّمْعَ وَالْأَبْصَارَ
وَالْأَفْئِدَةَ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ﴿٢٣﴾

24. Dheh Eebe waa midka dadkow **قُلْ هُوَ الَّذِي ذَرَأَكُمْ فِي الْأَرْضِ وَإِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٤٤﴾**
Dhulka idinku beeray isagaana (Qiyaa-
mada) loo soo kulmin doonaa Dadka.

Eebe awooddisa yaa wax walba ka sarreysa, Gargaare, Quudiye, Abuure iyo wax walba ogaadana waa isaga, maalinta Qiyaamana waa la hor imaan, Ruux walbana wuxuu ku Abaal Marin Camalkiisa. Nabiguna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiis ha yeelee) markii la warsaday sideo Dadka loogu soo kulmin Wajigooda:
Eebaha ku socodisiiyey Lughooda wuxuu karaa inuu ku socodisiiyo Wajigooda. Al-Mulk (19-24).

25. Waxay dhihi Gaaladu waa goorma **وَيَقُولُونَ مَتَى هَذَا الْوَعْدِ إِن كُنتُمْ صَادِقِينَ ﴿٤٥﴾**
Waqtiguu dhici waxa naloogu gooddin
haddaad run sheegaysaan.

26. Dheh Eebaa og goortaas, waxaanse
ahay Anigu u dige Cad (muuqda). **قُلْ إِنَّمَا الْغَايَةُ عِنْدَ اللَّهِ وَإِنَّمَا أَنَا نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٤٦﴾**

27. Markaysa Gaaladu Naarta oo u
dhow arkaan waxaa xumaan oo door-
soomi Wajiga Gaalada, waxaana lagu
dhihi waa ka Cadibaaddii aad doonay-
seen (dedejisanayseen). **فَلَمَّا رَأَوْهُ زُلْفَةً سَيِّمَتْ وُجُوهُ الَّذِينَ كَفَرُوا وَقِيلَ هَذَا
الَّذِي كُنتُمْ بِهِ تَدْعُونَ ﴿٤٧﴾**

28. Dheh balse ka warrama haddii Eebe
aniga (Nabiga) iyo inta ila jirta uu
halligo ama u naxariisto yaa Gaalo ka
korin Caddibaad daran. **قُلْ أَرَأَيْتُمْ إِن أَنهَلَكُنِي اللَّهُ وَمَن مَّعِيَ أَوْ رَحِمَنَا فَمَن
يُجِيرُ الْكَافِرِينَ مَن عَذَابِ الْبَئِيسِ ﴿٤٨﴾**

29. Dheh Eebe waa Raxmaan waana
rumaynay, waana Tala saarannay,
waadse ogaan doontaan (Gaalooy)
Cidda Baadi Cad ku sugan. **قُلْ هُوَ الرَّحْمَنُ ۖ ءَامَنَّا بِهِ وَعَلَيْهِ تَوَكَّلْنَا
فَسَتَعْلَمُونَ مَن هُوَ فِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ ﴿٤٩﴾**

30. Dheh balse Warrama hadday Biyu-
hu Dhulka ku gudhaan yaa idin siin
Biya durduri (ma jiro Eebe waxaan
ahayn). **قُلْ أَرَأَيْتُمْ إِن أَصْحَابُ مَاؤُورٍ عَوْرًا فَمَن يَأْتِيكُم
بِمَاءٍ مَّعِينٍ ﴿٥٠﴾**

Dadka xun had iyo jeer aad uma fikiraan saas daraaddeed waxay ku hadlaan gafaf iyo Xujooyin Qiimo daran, Nabiguna (Naxariis iyo Nabad gelyo Eebe korkiisa ha yeelee) Shaqadiisu waa inuu dadka wanaag ugu yeedho, xumaantana uga digo, wax walbase Eebaa kara oo og, markase uu Gaalada haleelo Caddibaad daran yey ogaan doonaan dhabta iyo xaqiiqada, gargaarka kuwa xaqa rumecyey iyo Imtixaankoodaba Eebaa leh, Gaalana Caddibaad kama baajinayso, ee waa in Eebaha Raxmaan ee awoodda leh ee dadka quudiya isaga uun la Caabudaa lagana yaabaa. Al-Mulk (25-30).

Suurat Al-Qalam

سُورَةُ الْقَلَمِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Qalinka iyo waxa Malaa'igtu qorayso (Camalka dadka).

2. Ee Nabiyow Nicmada Eebe darteed lama waallid.

3. Waxaana kuu sugnaaday Ajri aan go'ayn.

4. Waxaana kuu sugnaaday dabeeco (fiican) oo weyn.

5. Waad arki doontaa nabiyow Gaaladuna way arki doonaan.

6. kiinna waalan (ama la caddibo).

7. Eeba waa ogyahay Cidda ka dhunta Jidkiisa, waana ogyahay Cidda hanuunsan.

8. Ee Nabiyow ha maqlin xaq beenyayaasha (Warkooda).

9. Waxay jecel yihiin inaad u iilato iyana kuu soo iishaan.

10. Ha maqlin dhaar badane dhammaantiis oo dullaysan.

11. oo Xanlow ah, isku diraa ah.

12. Khayrka iyo Xoolahana reebta, gardarrow iyo dambiile ah.

13. Xumaantana ku madax adag isku dhejisna ah (xumaanlow ah).

14. inuu Xoolo iyo Wiilal uu leeyahay darteed (yuu saas u falay).

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

ت وَالْقَلَمِ وَمَا يَسْطُرُونَ ﴿١﴾

مَا أَنْتَ بِنِعْمَةِ رَبِّكَ بِمَجْنُونٌ ﴿٢﴾

وَإِنَّ لَكَ لَأَجْرًا غَيْرَ مَمْنُونٍ ﴿٣﴾

وَإِنَّكَ لَعَلَّ خُلِقْتَ عَظِيمٌ ﴿٤﴾

فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ حِينَ تَقُومُ ﴿٥﴾

بِأَيِّ كُورٍ أَلْمَقْتُونَ ﴿٦﴾

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ بِمَنْ ضَلَّ عَنْ سَبِيلِهِ وَهُوَ أَعْلَمُ

بِالْمُهْتَدِينَ ﴿٧﴾

فَلَا تَطْعَمُ الْمَكِيدِينَ ﴿٨﴾

وَدُّوا لَوْ تُدْهِنُ فَيُدْهِنُونَ ﴿٩﴾

وَلَا تَطْعَمُ كُلَّ سَلَابٍ مَّهِينٍ ﴿١٠﴾

هَمَّازٍ مَّشَاءً بِنَمِيمٍ ﴿١١﴾

مَنَاعٍ لِّلْخَيْرِ مَعْتَدٍ أُنِيمٍ ﴿١٢﴾

عُلَّ بَعْدَ ذَلِكَ رُنِيمٍ ﴿١٣﴾

أَنْ كَانَ ذَا مَالٍ وَنَدِيمٍ ﴿١٤﴾

15. Marka Quraankannaga lagu akh-riyana wuxuu dhahaa waa dadkii hore warkoodii.

إِذْ أَتَى عَلَىٰ آيَاتِنَا قَالَ أَأَسْطِطِرُ بِأَلْوَابِنَ ﴿١٥﴾

16. wuxuuse Eebe ka calaamayn San-qaroorka.

سَنَسِيْمُهُ عَلَىٰ الْخَرْطُومِ ﴿١٦﴾

Eebe Nabiga wuxuu ugu nicmeeye Ajri weligii socda, iyo Akhlaaq wanaagsan, dadkuna iskuna qasna Eebe agtiisa, cid walba mid toosan iyo mid dhunsan, weligaana ha maqlin warka ruuxa xanllowga ah, beenlowga ah, isku diraaga ah, xumaan jecaylka ah.

Nabigana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxay ahayd Dabecadiisu quraanka siday Caa'isha sheegtay. Wuxuuna yidhi: Jannada ma galo Namiimiye. Al-Qalam (1-16).

17. Eebe wuu Imtixaanay Gaaladii (Reer Makaad) sidii loo imtixaanay kuwii beerta markay ku dhaarten inay Aroortii goostaan.

إِنَّا بَلَوْنَهُمْ كَمَا بَلَوْنَا أَصْحَابَ الْجَنَّةِ إِذْ أَقْسَمُوا لَيَصْرِمُنَّهَا مُصْرِمِينَ ﴿١٧﴾

18. Iyagoon dhihin haddii Eebe idmo.

وَلَا يَسْتَنْبِئُونَ ﴿١٨﴾

19. Waxaase Beertii xagga Eebe uga yimid Amar iyagoo hurda.

فَطَافَ عَلَيْهَا طَائِفٌ مِّن رَّبِّكَ وَهُمْ نَائِمُونَ ﴿١٩﴾

20. Waxayna noqotay wax la shafay oo kale.

فَأَصْبَحَتْ كَالصَّرِيرِ ﴿٢٠﴾

21. wayna isu dhawaaqeen Subaxdii.

فَتَنَادَوْا مُصْرِمِينَ ﴿٢١﴾

22. Iyagoo leh kallaha oo beerta goosta.

أَنِ اعْبُدُوا عَلَيَّ حَرْفًا مِّنْ كُنُوزِ صِرِّينَ ﴿٢٢﴾

23. wayna tageen iyagoo Codka hoos u dhigi.

فَأَنطَلَقُوا وَهُمْ يَتَخَفَتُونَ ﴿٢٣﴾

24. inaan Beerta maanta Miskiin soo gelin.

أَن لَّا يَدْخُلَهَا الْيَوْمَ عَلَيْكُمْ مَسْكِينٌ ﴿٢٤﴾

25. Wayna kallaheen iyagoo diiddan (in Miskiin u soo galo).

وَعَدَّوْا عَلَيَّ حَرْفًا مِّنْ قُدْرِينَ ﴿٢٥﴾

26. Markii ay arkeen Beertii siday tahay yey isu dhaheen waan soo dhunnay.

فَلَمَّا رَوَّاهَا فَأَلْوْا بِهَا لِمَا لَوْنَ ﴿٢٦﴾

27. haddana way isgarteen waxayna dhaheen ma ehee waa la ina hoojiyey.

بَلْ نَحْنُ مَحْرُومُونَ ﴿٢٧﴾

28. Markaas kii u fiicnaa yiri: miyaana idin dhihin war Eebe weyneeya.

قَالَ أَوْسَطُهُمْ أَلَمْ أَقُلْ لَكُمْ لَوْ لَا نُنسَخُكُم مِّنْ أَلْفِ لَيْلَةٍ لَّوَدَّعَيْنَاكُمْ ﴿٢٨﴾

29. Markaasay dheheen Eebaa weyn. waan xad gudubnay.

فَأَلْوَسْنَا مِنْهُمْ فَاكْفُرُوا بِنَا إِنَّا كُنَّا ظَالِمِينَ ﴿٢٩﴾

30. Markaasaa qaarba qaar ku jeedsaday iyagoo is dagaali.

فَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ يَتْلُونَ ﴿٢٥﴾

31. Waxayna dheheen Magacaanna ba'ye waan xad gudubnay.

قَالُوا لَوْ كُنَّا نَسْمَعُ أَوْ نَعْقِلُ مَا كُنَّا فِي أَصْحَابِ آلِ فِرْعَوْنَ ﴿٢٦﴾

32. Eebe wuxuu u dhow yahay inuu noogu beddelo mid ka fiican, isagaan Khayr ka rajaynaynaa eh.

عَسَىٰ رَبِّنَا أَنْ يَبَدِّلَنَا خَيْرًا مِّنْهَا إِنَّا إِلَىٰ رَبِّنَا رَاغِبُونَ ﴿٢٧﴾

33. Caddibaaddu waa saas, Caddibaadda Aakharaase ka weyn haddii ay wax og yihiin.

كَذَٰلِكَ الْعَذَابُ وَالْعَذَابُ الْآخِرُ أَكْبَرُ لَوْ كَانُوا يَعْلَمُونَ ﴿٢٨﴾

Aduunku waa Imtixaan, waase in Ruuxu ka faa'iidaysto Imtixaanka oo isa saxaa hadduu qalloocsan yahay, sidaa Reer Maka ahaayeen iyo wixii la mid ah, Qisadanna waa Qiso weyn oo Xikmo iyo waano ku jirto, saas daraaddeed waa inaan Ruuxna isla weynaannin, wanaag inuusan samayn ku dhaaranin, Masaakiinta iyo dadka tabarta daranna gooynin, haddii kale ha sugo Caddibaadda adduunku iyo mid Aakhiraba.

Dambiguba Rizqiga yuu Dadka hoojiyaa siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelee). Al-Qalam (17-33).

34. Kuwa Eebe ka dhowrsada waxay Eeba agtiisa ku leeyihiin «Jannada Naciima».

إِنَّ الْمُنَافِقِينَ إِندَرْتُهُمْ جَنَّاتٍ النَّعِيمِ ﴿٢٩﴾

35. Ma Muslimiinta yaannu kala mid dhigaynaa Dambilayaasha.

أَفَجَعَلَ الْمُسْلِمِينَ كَالْمُجْرِمِينَ ﴿٣٠﴾

36. Seed u dhihi kartaan saas.

مَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ ﴿٣١﴾

37. Mise Gaalooy waxaa idiin sugnaaday Kitaab aad akhrisataan.

أَمْ لَكُمْ كِتَابٌ فِيهِ تَدْرُسُونَ ﴿٣٢﴾

38. oo Waxaad doontaanba aad ka helaysaan.

إِنَّ لَكُمْ فِيهِ لَمَا تَخْتَرُونَ ﴿٣٣﴾

39. Mise ballan adag yaad naga qaaddeen tan iyo Maalinta Qiyaame oo waxaad rabtaan aad xukumaysaan.

أَمْ لَكُمْ أَعْيُنٌ عَالِيَةٌ بَلَّغَةٌ إِيَّايَوْمِ الْقِيَامَةِ إِنَّا كَذِبُكُمْ ﴿٣٤﴾

تَحْكُمُونَ ﴿٣٤﴾

40. Weydii (Nabiyow) Gaalada Cidda damiinka ugu ah Xaalkaas.

سَأَلْتُمُوهُم بِذَلِكَ زَعِيمٌ ﴿٣٥﴾

41. mise dad la wadaaga Arrintaas yey leeyihiin, ha keeneen kuwaas hadday run sheegi.

أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ فَلْيَأْتُوا شُرَكَاءَهُمْ إِنْ كَانُوا صَادِقِينَ ﴿٣٦﴾

42. Maalinta dhudhunka la faydi doono

يَوْمَ يُكْفَتُ عَنْ سَاقٍ وَيُدْعَوْنَ إِلَى السُّجُودِ

Gaaladana loogu yeedhi doono inay sujuudaan ma karayaan Sujuud.

﴿٤١﴾ فَلَا يَسْتَطِيعُونَ

43. Indhaha Gaaladu Maalintaas waa dullaysan yihiin waxaana ka muuqda Walbahaar iyo qoomammo, waxayna ahaayeen (Adduunka) kuwa loogu yee-ray Sujuud iyagoo nabad qaba.

خَشِيعَةً أَبْصَرُهُمْ تَرَ هُمْ ذَلِيلَةً وَقَدْ كَانُوا يَدْعُونَ إِلَىٰ

السُّجُودِ وَهُمْ سَالِمُونَ ﴿٤٣﴾

Eebe Cid walba wuu abaal mariyaa, Muslim iyo Gaal, wanaag fale iyo xumaan falana isku mid kama dhigo, Gaalana wax Xuja ah uma haysato xumaantooda, Maalinta Qiyaamana dadka xun Eebe wuu imtixaani wuxuuna fari inay Sujuudaan, hase yeeshee ma karayaan, maxaa yeelay adduunkii yeyan sujuudi jirin iyagoo nabad qaba, dulli iyo qoomammo yaana ka muuqan Maalintaas. Al-Qalam (34-43).

44. Isu kaanna daa aniga iyo kuwa beeniyey Quraanka waana sasabi iya- goon ogeyn.

فَلَذَرْنِي وَمَنْ يَكْذِبْ بِهَذَا الْحَدِيثِ سَنَسْتَدْرِجُهُمْ

مِنْ حَيْثُ لَا يَعْشَوْنَ ﴿٤٤﴾

45. Waana sugi tan iyo muddo, Maa- mulka Eebana waa xoog badan yahay.

وَأُنْزِلَ لَهُمُ الْآيَاتِ كَيْدِي مَبِينٍ ﴿٤٥﴾

46. Nabiyow ma waxaad weydiisatay Gaalada Ujuuro oo markaas Cusleeyey.

أَمْ سَأَلْتَهُمُ أَجْرًا فَهَمَّ مِنْ مَعْرَمٍ مُتَقَلِّبُونَ ﴿٤٦﴾

47. Mise waxa maqan yaa aktooda yaal ooy wax ka qori.

أَمْ عِنْدَهُمُ الْعَيْبُ فَنَهُم بِكَفُورٍ ﴿٤٧﴾

48. Ku samiri Xukunka Eebe hana noqonnin sidii Saaxiibkii Xuudka (Mal- layga Yuunus) markuu u dhawaaqay Eebihis isaga oo walbahaarsan.

فَأَصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ وَلَا تَكُنْ كَصَاحِبِ الْأُخْتِ

إِذْ نَادَىٰ وَهُوَ مَكْظُومٌ ﴿٤٨﴾

49. Haddaan naxariista Eebe haleelin waxaa lagu tuuri lahaa Cidlo (bannaan) isagoo la dagaalay.

لَوْلَا أَن تَذَكَّرْنَاكَ بِرِعْمَةِ رَبِّكَ لَنَبَذْنَاكَ بِالْبَحْرِ

وَهُوَ مَذْمُومٌ ﴿٤٩﴾

50. Waxaase doortay Eebihis wuxuuna ka dhigay kuwa wanaagsan.

فَأَجْتَبَاهُ رَبُّهُ وَجَعَلَنَاهُ مِنَ الصَّالِحِينَ ﴿٥٠﴾

51. Waxay u dhow yihiin kuwii gaaloo- bay inay daymada kugu lagdaan mar- kay maqlaan Qur'aanka, waxayna dhihi waa waalan yahay (Nabigu).


وَإِنْ يَكَادُ الَّذِينَ كَفَرُوا لَيُزْلِقُونَكَ بِأَبْصَرِهِمْ لَمَّا

سَمِعُوا الذِّكْرَ وَيَقُولُونَ إِنَّهُ لَمَجْنُونٌ ﴿٥١﴾

52. Quraanka iyo Nabiguna waa uun waanada Caalamka.

وَمَا هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ لِلْعَالَمِينَ ﴿٥٢﴾

Amarka Eebaa iska leh, Ruux walbana suu doono yuu ku maamulaa, Quraankana isagaa soo dejiyey Nabiguna ujuuro kama rabin Cidna, waxaana had iyo jeer Eebe fari jiray xaq sheegid iyo adkaysi iyo dulqaad, Qur'aankuna waa raxmaddii Eebe Nabiga u soo dhiibay, mana habboona in Cidda akhriyi la guul guulo oo xumaan lagu tilmaamo, maxaa yeelay waa waanada Adduunka dhammaan. Nabiguna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): Eebe wuu u sugi Daalimka markuu qabtana ma fakiyo. Al-Qalam (44-52).



Suurat Al-Xaaqqah

سُورَةُ الْحَاقَّةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Maalinta Xaaqo (Qiyaamadu waa wax sugan).

الْحَاقَّةُ ﴿١﴾

2. Xaaqo maxay tahay.

مَا الْحَاقَّةُ ﴿٢﴾

3. inaadan aqoon ma laga yaabaa xaaqada.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْحَاقَّةُ ﴿٣﴾

4. Waxa beeniyeen Reer «Thamuud» iyo «Caadba» Qiyaamada.

كَذَّبَتْ ثَمُودُ بِوَاعِلٍ بِالْقَارِعَةِ ﴿٤﴾

5. Thamuudse waxaa lagu halligay Qaylo daran.

فَأَمَّا ثَمُودُ فَأُهْلِكُوا بِالطَّاغِيَةِ ﴿٥﴾

6. Caadna waxaa lagu halligay Dabayl daran oo qabow.

وَأَمَّا عَادُ فَأُهْلِكُوا بِمِصْرَ صَاعِيَاتِهِ ﴿٦﴾

7. oo lagu diray korkooda Toddoba habeen iyo Siddeed Maalmood oo israacsan, waxaadna arkaysaa iyagoo daadsan ood mooddo jirrid Timir (d gob dhacay).

سَحَّهَا عَلَيْهِمْ سَبْعَ لَيَالٍ وَفَنِيَةٌ يَوْمَ الْقِيَامِ حُسُومًا فَتَرَى الْقَوْمَ فِيهَا صَرْعَى كَأَنَّهُمْ أُخِيطَ بِحَبَلٍ بِسَائِرِهِ ﴿٧﴾

8. wax ka hadhay miyaad aragtaa.

فَمَا تَرَى أَهْمُونَ بِأَقْبَاتِهِ ﴿٨﴾

9. waxaa la yimid Falkii danbiga ahaa: Fircoon iyo Kuwii ka horreeyay iyo Kuwii tuulooyinkooda la daba geddiyey (Nabi Luud Qoomkiisii).

وَصَاةٍ وَرَعُونَ مِنْ قَبْلِهِ، وَالْمُؤْتَفِكِينَ بِالْخِطَابَةِ ﴿٩﴾

10. Waxay Caasiyeen rusushii Eebahood Markaasuu si daran u qabtay.

فَصَوَّرُوا رَسُولَ رَبِّهِمْ فَأَخَذَهُمْ لَذَّةَ لَيْلِيَةٍ ﴿١٠﴾

11. Markay Biyihii xad dhaafeen (Waqtiigii Nabi Nuux) waxaan idinku xambaarnay (Awoow yaalkiin) Doontii.

إِنَّا لَنَاطِقُهَا الْمَاءَ حَمَلَتُكُنَّ فِي الْبَحَارِيبِ ﴿١١﴾

12. si aan uga yeelno waano ay una xafiddo dhag wax maqasha.

لِيَجْعَلَهَا لَكُمْ تَذْكَرَةً وَرَعِيهَا أَذُنٌ وَعِيَةٌ ﴿١٢﴾

Qiyaamadu waa xaq sugan, Ciddii Xoog isbiddana oo xaqa iyo Qiyaamada beenisana Eebaa ka awood badan, sida Aayadahani noo Caddeeyeen, sida Qoomkii Nabi Saalax, Nabi Huud, Nabi Luud, Nabi Nuux iyo Fircoon iyo kuwii ka horreeyey. waana in lagu waana qaato Arrintaas, xumaanta xaq diidnimada iyo Kibirkana la iska jiro waa sababaha halaagee.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeclee): Waxaa laygu gargaaray (Dabaysha) Saba, ree Caadna waxaa lagu halaagay (Dabaysha Dabuur). Al-Xaaqqah (1-12).

13. Marka Suurka la afuufo hal mar.

فَإِذَا نَفَخَ فِي الصُّورِ نَفْحَةٌ وَحِدَةٌ ﴿١٣﴾

14. Dhulka iyo Buurahana la xambaaro oo la burburiyo hal mar.

وَجُمَلَتِ الْأَرْضُ وَالْجِبَالُ فَدُكَّتَا دَكَّةً وَحِدَةً ﴿١٤﴾

15. Maalintaasay Qiyaamadu dhacaysaa.

فَيَوْمَئِذٍ وَقَعَتِ الْوَاقِعَةُ ﴿١٥﴾

16. Samaduna Maalintaas way dillaaci wayna tabar yaraan.

وَأَسْقَتِ السَّمَاءَ فَيَهِىَ يَوْمَئِذٍ وَاهِيَةً ﴿١٦﴾

17. Malaa'igtuna Cirka gaararkiisa yey ahaan Maalintaas, Carshiga Eebana waxaa dadka korkiisa ku xambaari Maalintaas Siddeed Malag.

وَالْمَلَائِكَةُ عَلَىٰ أَرْجَائِهِمْ أُوتِيَتْ عَرِشَ رَبِّكَ فَوَهِهُنَّ يَوْمَئِذٍ تَمَنِّيَةً ﴿١٧﴾

18. Maalintaasaa dadka loo soo bandhigi Eebe wax xagooda kaga qarsoonna ma jiro.

يَوْمَئِذٍ تُعْرَضُونَ لَا تَخْفَىٰ مِنْكُمْ خَافِيَةٌ ﴿١٨﴾

19. Ruuxiise Kitaabkiisa midigta laga siiyo wuxuu dhihi (farax daraadiis) akhriya Kitaabkayga.

فَأَتَانَهُنَّ أُولَىٰ كَتَبَهُنَّ بِسَمِيْنَةٍ وَقَوْلُهُنَّ هَآؤُنَّ أَقْرَأُوا وَإِكْبِيَةَ ﴿١٩﴾

20. Waxaan yaqiinsanaa (Adduunka) inaan la kulmi Xisaabtayda.

إِنِّي طَنَنْتُ أَنِي مَلِيْحٍ حِسَابِيَةَ ﴿٢٠﴾

21. wuxuu ruuxaasi ku noolaan nolol laga raalli yahay.

فَهُمْ فِي عِيسَةِ رَاضِيَةٍ ﴿٢١﴾

22. Wuxuuna geli «Janno» sarreeysa.

فِي جَنَّةٍ عَالِيَةٍ ﴿٢٢﴾

23. Midhaheeduna u dhaw yihiin (Ruuxa guran).

فَطُورُهَا رَآئِيَةٌ ﴿٢٣﴾

24. Waxaana lagu dhihi Cuna oo Caba idinkoo shifaysan Camalkaad hor marsateen ayaamihii tegay daraadiis (Adduunkii).

كُلُّوْا وَأَشْرُوْا هَيْتًا بِمَا أَسْلَفْتُمْ فِي الْأَيَّامِ الْخَالِيَةِ ﴿٢٤﴾

Eebe isagaa awoodda leh abuurayna Dunida, wuxuuna dadka u darbay maalinta Qiyaame oo Ruux walba laga Abaal marin Camalkiisii, waa Maalinta Dhulka, Buuraha iyo Cirkuba doorsoomi oo burburi, wax Eebe ka qarsoomi ama ka fakanna uusan jdirin, dadka wanaagsanna waxaa lagu abaal marin wanaag, Janno, Farax iyo Bishaaro ku noolaansho.

Cumar Binu Khadhaabna wuxuu yidhi: Xisaabiya Naftiina intaan la xisaabinin Miisaamana intaan la miisaamin iyadaa idiin ka fudud Xisaabta Bariye. isuna Qurxiya Bandhiga wayn. Al-Xaaqqah (13-24).

25. Ruuxiise Kitaabkiisa laga siiyo Bidixda wuxuu dhahayaa Magacayba'ee maan la i siinin Kitaabkayga.

وَأَمَّا مَنْ أَوْفَىٰ كِتَابَهُ بِرِسْمِهِ لِيَقُولَ يُدْتَنِي لَأُوتَىٰ كِتَابِيَةَ ﴿٢٥﴾

26. Xisaabtaydana maanan ogaanin.

وَلَأُدْرِمَ آجِسَابِيَةَ ﴿٢٦﴾

27. Magaacayba'ee maxaan u soo noolaaday.

يُدْتَنِيهَا كَاتِبَاتُ الْفَاقِصِيَةِ ﴿٢٧﴾

28. Xoolahaygi wax iima tarin.

مَا أَتَىٰ عَنِّي مَالِيَةَ ﴿٢٨﴾

29. Waxaa lumay awooddaydii (iyo xujadaydii).

هَلَكَتْ عَنِّي سُلْطَانِيَةَ ﴿٢٩﴾

30. Waxaa loo odhan qabta oo Gacmihiisa iyo luquntiisa isku xira.

خُذُوهُ فَعَلُوهُ ﴿٣٠﴾

31. Naarta Jahannamada geliya.

لَأُدْرِمَ الْجَحِيمَ صَلْوَةً ﴿٣١﴾

32. Markaas geliya Silsilad Toddobaatan dhudhun ah.

لَأُدْرِي سِلْسِلَةً دَرَّتْهَا سَبْعُونَ ذِرَاعًا فَاسْلُكُوهُ ﴿٣٢﴾

33. maxaayeelay wuxuu ahaa kaan rumaynin Eebaha weyn.

إِنَّهُ كَانَ لَا يُؤْمِنُ بِاللَّهِ الْعَظِيمِ ﴿٣٣﴾

34. aana farijirin in Masaakiinta wax lasiiyo.

وَلَا يَخْضُ عَلَىٰ طَعَامِ الْمُسْكِينِ ﴿٣٤﴾

35. Maanta (Qiyaamada) kuma leh Saaxiib.

فَلَيْسَ لَهُ الْيَوْمَ هُنَا حَمِيرٌ ﴿٣٥﴾

36. Cunnana kuma leh aan ahayn dheecaanka «Ehlu Naarka».

وَأَطْعَامِ الْإِيمَانِ غَسْلِينَ ﴿٣٦﴾

37. Cunnadaasna ma cuno kuwa gafay waxaan ahayn (Gaalada).

لَا يَأْكُلُهُ إِلَّا الْخَاطِلُونَ ﴿٣٧﴾

38. Waxaan ku dhaaran waxaad aragtaan (Makhluuqaad ah).

فَلَا أَقْسِرُ بِمَا تَجِيرُونَ ﴿٣٨﴾

39. iyo waxaydaan arkayninba.

وَمَا لَا تَجِيرُونَ ﴿٣٩﴾

40. ee Qur'aanku waa hadalkii Eebe uu u soo dhiibay Rasuul Sharaf leh.

إِنَّهُ لَقَوْلُ رَسُولٍ كَرِيمٍ ﴿٤٠﴾

41. Hadal gabayaana ma aha, wax yar yaadse rumaynaysaan (Xaqa).

وَمَا هُوَ بِقَوْلِ شَاعِرٍ قَلِيلًا مَّا تُوْمَنُونَ ﴿٤١﴾

42. Hadal wax sheegana ma aha wax yar yaadse waantomaysaan.

وَلَا يَقُولُ كَاهِنٌ قَلِيلًا مَّا تَدَّكُرُونَ ﴿٤٢﴾

43. (Qur'aanku) wuxuu ka soo degay Eebaha Caalamka.

تَنْزِيلٌ مِّن رَّبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٤٣﴾

Xaqdiidayaasha waxaa lagu abaal marin maalinta qiyaame xumaantay kasbadeen, waxaana laga siin Kitaabkooda xagga bidix, markaasay Calaacali, xaxaana la gelin Naar daran oo Cunno iyo Cabid Xun Mooye Wax kale lahayn. Qur'aankuna waa hadalkii Eebe, Rasuul sharaf leh yaana Eebe ku soo dejiyey, xumaanta iyo Ceebaha ay Gaaladu ku sheegeenna waa ka fog yahay, waana digniin iyo raxmadda Caalamka. Al-Xaaqqah (25-43).

44. Hadduu nagu been abuurto (Nabi Muxamed).

وَلَوْ نَقُولُ عَلَيْنَا بَعْضُ الْأَقَابِيلِ ﴿٤٤﴾

45. Waxaannu ku qaban gacan adag.

لَا خَذْنَا مِمَّنْهُ بِأَيْمِينِ ﴿٤٥﴾

46. Waxaannu gooynaynaa Xididka Wadnaha.

مُرْلَقَطًا مِمَّنْهُ أَلْوِيْنَ ﴿٤٦﴾

47. Ruux idinka mid ah oo naga celinna ma jiro.

فَمَا مِنْكُمْ مِّنْ أَحَدٍ عَنْهُ حَاجِزِينَ ﴿٤٧﴾

48. Qur'aankuna waa waanada kuwa Eeba ka dhawrsada.

وَإِنَّهُ لَتَذَكَّرٌ لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaan ognahay inay idin ka mid yihiin kuwa beenin (Qur'aanka).

وَأَنَّا نَتَعَلَّمُ أَنَّ مِنْكُمْ مُّكَذِّبِينَ ﴿٤٩﴾

50. Qur'aanku waa qoomamada Gaalada (Maalinta Qiyaame).

وَإِنَّهُ لَحَمْرَةٌ عَلَى الْكٰفِرِينَ ﴿٥٠﴾


51. Qur'aanka waa run dhab ah.

وَإِنَّهُ لِحَقٌّ لِّيٰقِينِ ﴿٥١﴾

52. Ee Nabiyyow u tasbiixso Magaca Eebe ee weyn.

فَسَبِّحْ بِأَسْمِ رَبِّكَ الْعَظِيمِ ﴿٥٢﴾

Qur'aanku waa hadalkii Eebe Nabiga Muxamad ah (Naxariis iyo Nabad gelyo korkiisa Eeba ha yeelee) uu ku soo dejiyey, Malaku Jibriilla soo gaarsiiyey, mana siyaadin karo Qur'aankuna waa waanada Mu'miniinta iyo kuwa xumaanta ka dhawrsada, waana xujo iyo qoomamada Gaalada, waana xaq sugan. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Watiinku waa taxanaha Qalbiga waana Xididkuu ku xidhanyahay. Al-Xaaqaah (44-52).



Suurat Al-Macaarij

سُورَةُ الْمَعَارِجِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Midbaa wuxuu Eebe warsaday in Caddibaad ku dhacda Gaalada (loo soo dedejiyo).

سَأَلَ سَائِلٌ بِعَذَابٍ وَاقِعٍ ①

2. Caddibaadaasna wax Gaalada ka Celin ma jiro.

لِلَّذِينَ نَفَرُوا بِرَبِّهِمْ لَهُمْ دَفْعٌ ②

3. Waxayna ka imaan Caddibaaddaasu Eebaha sarraynta iyo Sharafta u Saaxiiba.

مِنَ اللَّهِ ذِي الْمَعَارِجِ ③

4. Ee Malaa'igta kale iyo Jibriilba u koraan Maalin qaddarkeedu dhan yahay Konton Kun oo Sano.

تَعْرُجُ الْمَلَائِكَةُ وَالرُّوحُ إِلَيْهِ فِي يَوْمٍ كَانَ مِقْدَارُهُ ④
خَمْسِينَ أَلْفَ سَنَةٍ ⑤

5. Ee Nabiyow Samir Samir wanaagsan.

فَأَصْبَحَ صَبْرًا جَمِيلًا ⑥

6. Gaaladu waxay Caddibaadda u arkaan inay fogahtahay.

إِنَّهُمْ يَرَوْنَهُ بَعِيدًا ⑦

7. Annaguna waxaan u aragnaa inay dhawdahay.

وَرَوْنَهُ قَرِيبًا ⑧

8. Caddibaaddaasu waxay dhici Maa-linta Cirku noqon bir la dhalaaliyey oo kale.

يَوْمَ تَكُونُ السَّمَاءُ كَالْمُهْلِ ⑨

9. Buuruhuna ay noqon Suuf la tifay oo kale.

وَتَكُونُ الْجِبَالُ كَالْعِهْنِ ⑩

10. Sokeeyana uusan sokeeye wax warsanaynin.

وَلَا يَسْتَلُ جَدِيدًا حَمِيمًا ⑪

11. Wayna is arkayaan, dambiihuna wuxuu jeclaan inuu iskaga furto Maa-lintaas Caddibaadeeda Caruurtiisa.

يُبْصِرُ وَيُبْهِقُ بَهِقَتِهِ الْمَجْرُومَ لَوْ يَفْتَدِي مِنْ عَذَابٍ ⑫
يَوْمَئِذٍ بِسَبِيهِ ⑬

12. Haweenaydiisa, Walaalkiis.

وَصَبْحَتِهِ وَأَخِيهِ ⑭

13. Iyo qaraabadiisii soo dhawaynayey.

وَقَصِيلَتِهِ الَّتِي تُؤْوِيهِ ⑮

14. Iyo waxa Dhulka ku sugan dhammaan markaa uu nabad galo.

وَمَنْ فِي الْأَرْضِ جَمِيعًا ثُمَّ يُنْجِيهِ ﴿١٤﴾

Ma habboona in Caddibaad iyo halaag Eeba la weydiisto, maxaa yeelay Eebe isagaa awoodda leh, Cidduu doona ayuuna Ciqaabaa, markay Ciqaabtiisu timaaddana wax celin ma jiro. Qiyaamada shiddadeedana wax walba wuu la doorsoomaa qaraabanimana ma jirto, wuxuuna jeclaan dambiluhu inuu isku furto Qaraabadiisa Xoolihiisa Dhulka waxa jooga oo dhan markaana uu nabad galo, lagamase aqballo. Al-Macaarij (1-14).

15. Saas ma aha ee waxaa jirta Naar kulul (oo ay geli).

كَلَّا إِنَّهَا لَأَطْلَى ﴿١٥﴾

16. Waxayna siibi Galka (Madaxa iyo Jirka).

نَزَّاعَةً لِّلسَّوْبَى ﴿١٦﴾

17. Waxayna u dhawaaqi dadka jecdsaday xaqana diiday.

تَدْعُو أُمَّنَ أَدْبَرَ وَتَوَلَّى ﴿١٧﴾

18. Xoolahana kulmiyey oo hayey (oon xaqa ku biximin).

وَجَمْعًا فَأَوْعَى ﴿١٨﴾

19. Dadka waa la abuuray iyaga oo Naf jaclaysi badan.

*إِنَّ الْإِنْسَانَ لِرَبِّهِ لَكَنُفٍ ﴿١٩﴾

20. Haddii dhib taabto wuu argagaxaa.

إِذَا مَسَّهُ الشَّرُّ جَزُوعًا ﴿٢٠﴾

21. Hadduu khayr helana wuu reebaa.

وَإِذَا مَسَّهُ الْخَيْرُ مَمْنُونًا ﴿٢١﴾

22. Marka laga reebo Muslimiinta tukata.

إِلَّا الْمُصَلِّينَ ﴿٢٢﴾

23. Ee ah kuwa Salaaddooda daa'ima.

الَّذِينَ هُمْ عَنْ صَلَاتِهِمْ سَاهُونَ ﴿٢٣﴾

24. Kuwa Xoolahoodana xaq la ogyahay ka bixiya.

وَالَّذِينَ فِي أَمْوَالِهِمْ حَقٌّ مَّعْلُومٌ ﴿٢٤﴾

25. Siiyana kuwa baryootama iyo kuwaan wax haysan.

لِلسَّائِلِ وَالْمَحْرُومِ ﴿٢٥﴾

26. Kuwa rumeeya Maalinta Qiyaame (ee Abaal marinta).

وَالَّذِينَ يَصَّدَّقُونَ يَوْمَ الْدِينِ ﴿٢٦﴾

27. Kuwa ka Cabsaday, Caddibaadda Eebahood.

وَالَّذِينَ هُمْ عَنْ عَذَابٍ رَبِّهِمْ مُسْفِقُونَ ﴿٢٧﴾

28. Maxaa yeelay Caddibaadda Eebe wax ka Aamin ah ma jiro.

إِنَّ عَذَابَ رَبِّهِمْ غَيْرُ مَا مُنُّوا ﴿٢٨﴾

29. Kuwa ka ilaaliya Xubinta (dhalmaha) sino.

وَالَّذِينَ هُمْ لِأَعْتَابِهِمْ حَافِظُونَ ﴿٢٩﴾

30. Waxa ka soo haray Xaaskooda ama ay hanteen, taasna laguma dagaalo.

إِلَّا لَعَلَّ أَرْوَاهُمْ وَأَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُمْ فَإِنَّهُمْ غَيْرُ مَلُومِينَ ﴿٣٠﴾

31. Ruuxiise doona wax gudubsan kuwaa waa mid xad gudbay.

فَمَنْ ابْتغى وَرَاءَ ذَلِكَ فَأُولَئِكَ هُمُ الْعَادُونَ ﴿٣١﴾

32. Kuwa waxa lagu aaminay iyo Ballankaba ilaaliya.

وَالَّذِينَ هُمْ لِأَمْتِنِهِمْ وَعَهْدِهِمْ رِعُونَ ﴿٣٢﴾

33. Kuwa maraggooda si fiican u furay.

وَالَّذِينَ هُمْ بِشَهَادَتِهِمْ قَائِمُونَ ﴿٣٣﴾

34. Kuwa Salaaddooda xafida (dhawra).

وَالَّذِينَ هُمْ عَلَى صَلَاتِهِمْ يُحَافِظُونَ ﴿٣٤﴾

35. Kuwaasi waxay geli Jannooyin lagu Sharrifo.

أُولَئِكَ فِي جَنَّاتٍ مُّكْرَمِينَ ﴿٣٥﴾

Eebe wuxuu u darbay Xaq diidayaasha Naar daran oo jirka gubta, una yeedhi kii xaqa ka jeedsaday intuu adduunka joogay, waxaa kale oo ay Aayaduhu sheegi in dadka dabeecaddisu ay tahay in marka dhibaato heshana uu argagaxo markuu nicmo helana uu xaqa diido haseyeeshee kuwa mu'miniinta ah ee Salaadda tukada Xoolahoodana xaqa ka bixiya Qiyaamadana rumeyca Caddibaadna ka Cabsada, Farjigooda xumaanta ka ilaaliya iyagu wey nabad geli waxaana lagu sharrifi Jannada Eebe, maxaa yeelay waa kuwo ballan Ilaahay oofiyey. Al-Macaarij (15-35).

36. Maxaa u sugnaaday Gaalada oo ay xagga Nabiga u deg degi (iyagoo beenin).

فَالَّذِينَ كَفَرُوا فَبِمَا كَانُوا يَكْفُرُونَ ﴿٣٦﴾

37. Iyagoo midigta Nabiga iyo Bidixdii-saba Koox Koox u jooga.

عَنِ الْجِبِينَ وَعَنِ الشَّمَالِ عِزِينَ ﴿٣٧﴾

38. Ma wuxuu damci Ruux kasta oo ka mid ah in la geliyo Jannatu Naciima.

أَيُّظْمُ كُلِّ أَمْرٍ مِنْهُمْ أَنْ يَدْخُلَ جَنَّةَ نَعِيمٍ ﴿٣٨﴾

39. Saas ma aha ee waxaan ka abuuray waxay ogyihiin.

كَلَّا إِنَّا خَلَقْنَاهُمْ مِمَّا يَعْلَمُونَ ﴿٣٩﴾

40. Waxaan ku dhaaran Qorrax ka soo baxyada iyo Qorrax u dhacyada ee waan karraa.

فَلَا أَقْسَمُ رَبِّ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ إِنَّا لَقَادِرُونَ ﴿٤٠﴾

41. Inaan ku baddallo kuwa ka khayr badan, nagamana dheerayn karaan.

عَلَىٰ أَنْ نُبَدِّلَ خَيْرًا مِنْهُمْ وَمَا نَحْنُ بِمَسْبُورِينَ ﴿٤١﴾

42. Ee iska dhaaf ha dhumbadeen eh (xumaanta) hana Ciyaareen intay kala kulmaan Maalintoodii Qiyaame ee loogu goodiyey.

فَذَرَهُمْ خَوْضًا يُلْعَبُونَ حَتَّىٰ يَلْقَؤُا يَوْمَهُمُ الَّذِي بَعُدُوا ﴿٤٢﴾

43. Maalinta ay ka soo bixi Qubuuraha iyagoo deg degi ood mooddo inay u laxaadsan Calaamo loo taagay (xaggooda).

يَوْمَ يَخْرُجُونَ مِنَ الْأَجْدَاثِ سِرَّاءَ كَأَنَّهُمْ إِلَىٰ نُصُبٍ
يُوَفُّونَ ﴿٤٣﴾

44. Aragooduna waa dullaysan yahay Maalintaas, waxaana ka muuqda oo dabooli dulli, Maalintaasuna waa Maalintii loogu yaboohay (Abaal marinteeda).

خَشِيعَةً أَبْصَرُهُمْ تَرَهِفُهُمْ ذَلَّةً ذَلَّةً يَوْمَ الَّذِي
كَانُوا يُوعَدُونَ ﴿٤٤﴾

Waxaa jirtay in xaqdiidayaashii Reer Makaad ay Nabiga ku soo ururi jireen, iyagoo Koox Koox ah oo haddidaad iyo beenin ku dheehan, haddana damci inay wanaag iyo khayr helaan, waxaase wanaag hela Ciddii kasbata, Eebana wuu karaa inuu halaago kuwa dambiilayaasha kuna baddalo kuwa ka khayr badan, hase Ciyaaro oo dambi ha falo ciddii doonta waxay uun la kulmi doontaa Maalinta Abaal marinta ee Dadka la soo bixin Dambiilana Dulli ka muuqdo, waa Maalinta Qiyaame. Al-Macaarij (36-44).



Suurat Nuux

سُورَةُ نُوحٍ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Annagaa Nabi Nuux u dirray Qoomkiisii si uu ugu digo Caddibaadda horteed.

2. Wuxuuna ku yidhi Qoomkayow waxaan idiin ahay dige Cad «oo muuqda».

3. ee Eebe Caabuda kana dhawrsada'anigana i adeeca.

4. Wuu idiin dambi dhaafi wuuna idin dib dhigi ilaa muddo Magacaaban, marka Eebe la yimaaddo ajasha wax dib u dhigi ma jiro haddaad wax ogtihiin.

5. Nabi Nuux wuxuu yiri Eebow waan u yeeray Qoomkaygii Habeen iyo dhaaraar.

6. Yeedhiddayduna uma siyaadinin waxaan carar ahayn.

7. Markasta oo aan u yeedhana si aad ugu dambi dhaafto waxay farahooda yeelaan dhagahooda, maryahoodana way isku dadaan, wayna ku Madax adaygaan xumaanta wayna is weyneyaan.

8. si kor ah yaan ugu yeedhay, «dadka dhexdiisa».

9. Waana u qaylyey, hoosna waan ugu yeeray.

10. Waxaana ku idhi Eebihii dambi

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِنَّا أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِ أَنْ أَنْذِرْ قَوْمَكَ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١﴾

قَالَ يَقَوْمِ إِنِّي لَكُمْ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٢﴾

أَنِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَأَنْتَهُوَ وَأَطِيعُوا ﴿٣﴾

يَعِزُّزْ لَكُمْ مِنْ دُونِكُمْ وَيُخَذِّرْكُمْ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى ﴿٤﴾
إِن أَجَلَ اللَّهِ إِذَا جَاءَهُ لَا يُؤَخَّرُ لَوْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٥﴾

قَالَ رَبِّ إِنِّي دَعَوْتُ قَوْمِي لَيْلًا وَنَهَارًا ﴿٦﴾

فَلَمَّا بَرَزْتُ لَهُمْ وَعَلَىٰ آيَاتِي أَفْرَارًا ﴿٧﴾

وَإِنِّي كَلَّمَاِذِ عَرَّفْتُهُمْ لَتَغْفِرَ لَهُمْ جَعَلُوا أَصْدِقَاءَهُمْ فِي عَادَاتِهِمْ وَأَسْتَشْفَعُونَ بِنِسَابِهِمْ وَأَصْرُوا وَأَسْتَكْبَرُوا ﴿٨﴾
أَسْتَكْبَرُوا ﴿٩﴾

ثُمَّ إِنِّي دَعَوْتُهُمْ جَهَارًا ﴿١٠﴾

ثُمَّ إِنِّي أَعْلَنْتُ لَهُمْ وَأَسْرَرْتُ لَهُمْ إِسْرَارًا ﴿١١﴾

فَقُلْ أَستَغْفِرُكُمْ وَأَرْبَابِكُمْ إِنَّهُ كَانَ عَفُورًا ﴿١٢﴾

dhaaf weydiista waa dambi dhaaf ba-danee.

11. Cirkana Roob badan ha idinka keenee.

يُرْسِلُ السَّمَاءَ عَلَيْكَ مِدْرَارًا ﴿١١﴾

12. Hana idiin kordhiyo Xoolo iyo Wiilal iyo Beero hana idiin yeelo Wabi yaal.

وَنُمِدُّكَ بِأَمْوَالٍ وَيْنٍ وَنَجْعَلُ لَكَ جَنَّاتٍ وَنَجْعَلُ لَكَ أَنْهَارًا ﴿١٢﴾

13. Maxaad leedihiin ood weynida Eebe uga cabsoon weydeen.

مَا لَكَ أَلَّا تَرْجُونَ لِلَّهِ وَقَارًا ﴿١٣﴾

14. Isagoo idin abuuray idinkoo soo maray Xaalado kala duwan.

وَقَدْ خَلَقْنَا أَطْوَارًا ﴿١٤﴾

Nabi Nuux wuxuu Eebe u diray Qoomkiisii si uu ugu digo haseyeeshee waa beeniyeen in kasta oo uu si walba ugu yeedhay, habeen iyo dharaar, kor iyo hoos, waxayna ahaayeen kuwa madax adag sida quraanku meela badan ku sheegay, dhagahayna furaysteen, dharkoodii bay isku duuduubeen si ayan xaqa u maqal, inkasta oo Nabigu ugu yeedahy xaqa, Nuux (1-14).

15. Miyaydaan arkaynin sida Eebe u Abuuray toddoba Samo oo isdulsaaran.

أَلَمْ تَرَ أَنَّا كَيْفَ خَلَقْنَا اللَّهَ سَبْعَ سَمَوَاتٍ طِبَاقًا ﴿١٥﴾

16. Dayaxana uga yeelay Dhexdooda Nuur, qorraxdana ka yeelay siraad.

وَجَعَلْنَا الْقَمَرَ فِيهِنَّ نُورًا وَجَعَلْنَا الشَّمْسُ سِرَاجًا ﴿١٦﴾

17. Eebe waa Kan idinka soo Bixiyay Dhulka.

وَاللَّهُ أَنْتَبَهُمْ مِنَ الْأَرْضِ نَبَاتًا ﴿١٧﴾

18. Haddana idinku Celin doona Dhexdiisa idinkana soo bixindoona.

ثُمَّ يُعِيدُكُمْ فِيهَا وَيُخْرِجُكُمْ إِخْرَاجًا ﴿١٨﴾

19. Eebe waa kan Idiinka yeelay Dhulka gogol.

وَاللَّهُ جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ بِسَاطًا ﴿١٩﴾

20. Si aad ugu socotaan Dhexdiisa waddooyin waawayn.

لِتَسْلُكُوا مِنْهَا سُبُلًا فِجَاجًا ﴿٢٠﴾

waa in dadku Eebe ka yaabo, Eegana siduu u abuuray cirkana dayax nuurahayo iyo qorrax ifaysana ugu yeelay, dadkana dhulka ka soo bixiyay kuna celin doona markay dhintaan kana soo bixindoona waqtiga abaalmarinta, dhulkana Gogol uga dhigay, waddooyinna uga jeexay ay danahooda ku qabsadaan, Eebaha saas ah yay waajib tahay in kaligii la caabudo, luguna mahadiyo. Nuux (15-20).

21. (Nabi) Nuux wuxuu yidhi Eebow way I caasiyeen waxayna Raaceen kuwo aan xoolohoodu iyo Carrurtoodu

قَالَ نُوحٌ رَبِّ إِنِّي عَصَيْتُكَ وَأَتَّبَعْتُ مَلَائِكَةَ الْمَلَائِكَةِ وَابْتَعْتُ مَن لَّمْ يَزِدْهُ مَالًا وَوَلَدَهُ إِلَّا خُسْرًا ﴿٢١﴾

waxaan khasaara ahayn u kordhinaynin.

22. Dhagar waynna way Dhakreen.

وَمَكْرُؤًا مَكَرَ الْجَانِّ ۝٢٢

23. Waxay isu Dheheen ha ka tagina Ilaahyaalkiinna, hana ka Tagina wuddi iyo suwaac iyo yaguuth, iyo Yacuuq iyo Nasri.

وَقَالُوا لَا تَنْزِيلَ لَنَا مِنَ السَّمَاءِ إِلَّا نُبْحَالُ الْمَوَدَّةِ الْأُولَىٰ ۚ وَمَا نُنزِلُ إِلَّا فِي هَيْئَةِ السَّحَابِ ۝٢٣

24. Waxayna Dhumiyeen dad Badan ee Eebow ha u kordhinnin Daalimiinta waxaan baadi ahayn.

وَقَدْ أَضَلُّوا كَثِيرًا وَلَا تَزِدِ الظَّالِمِينَ إِلَّا ضَلَالًا ۝٢٤

25. Gafkoodii Dartiis yaa loo Maansheeyay Naarna Loo Galiyey, mana helayaan Eebe ka soke gargaare.

يَمَّا خَطَّ بِهَا لَئِيمًا قَدْ غَوَىٰ فَاذْخُلُوا نَارًا فَامْرَأَتُهَا أُنثَىٰ حَبْلٍ مُنقَطٍ ۚ فَكَفَىٰ لَهُمْ لِقَاءُ رَبِّهِمْ أَعْتَابًا ۝٢٥

26. Nuux wuxuu yidhi Eebow ha kaga tagin Dhulka korkiisa Gaalada Ruuxna.

وَقَالَ نُوحٌ رَبِّ لَا تَذَرْنِي عَلَى الْأَرْضِ مِنْ الْكٰفِرِينَ ۖ دِيَارًا ۝٢٦

27. Maxaayeelay Hadaad kaga tagto waxay Dhumina Addoomahaaga, mana dhalayaan waxaan gaal xun ahayn.

إِنَّكَ إِن تَذَرَهُمْ خُلَافَةً يُعْبَدُونَكَ أَكْثَرِ الْأُمَّةِ الْأَنفَالِ ۝٢٧

28. Eeboow u dambi Dhaaf Aniga iyo waalidiintay iyo ruuxii gala gurigeyga isagoo Mu'min ah Rag iyo haweenba, hana u kordhinnin Daalimiinta waxaan halaag ahayn.

رَبِّ اغْفِرْ لِي وَلِوَالِدَيَّ وَلَا تُخِلْ بَيْنَ مَوَدَّةِ الَّذِينَ آمَنُوا وَلَا يَتُوبُونَ عَلَيْهِمْ وَالْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ وَلَا تَزِدِ الظَّالِمِينَ إِلَّا تَبَارًا ۝٢٨

Qoomkii nabi Nuux way beeniyeen xaqii, wayna caasiyeen, waxayna warkiisa raaceen madaxdoodii xuma taliska ahayd, waxayna isfareen inayna ka tagin caabudidii ilaahyaalkoodii, dad badanna way dhumiyeen, dambigoodii dartiis yaana biyo loogu halaagay naarna loo galiyay gargaare Eebe ka soo hadhayna ma ayna helin, markaas nabi Nuux wuu habaaray Eebana waa ka aqbalay, maxaa yeelay waxaan xumaan iyo fassad ahayn ma ayna falayn, mu'miniintana wuu u duceeyay iyo intii raacdayba rag iyo haween, gaalana halaag yuu Eebe u warsaday. Nabiguna wuxuu yidhi (ha la saaxiibin waxaan mu'min ahayn, quudkaagana yuusan cinin ruuxaan Eebe ka cabsade ahayn). Imaam Axmad-Baa Abii Saciid ka wariyay. Nuux (21-28).



Suurat Al-Jinn

سُورَةُ الْجِنِّ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad Dhahdaa (Nabiyow) waxaa lay waxyooday inay Dhagaysteen Koox Jinni ah (Quraanka) Dheheen waxaan maqallay quraan layaab leh.

قُلْ أُوحِيَ إِلَيَّ أَنَّهُ اسْتَمَعَ نَفَرٌ مِّنَ الْجِنِّ فَقَالُوا إِنَّا سَمِعْنَا قُرْآنًا عَجَبًا ﴿١﴾

2. Oo ku hanuunin xaqa waana Ru-maynay waxaan Eebe cibaada la wadaajinaynana ma jiro.

يَهْدِي إِلَى الرُّشْدِ فَآمَنَّا بِهِ وَلَنْ نُشْرِكَ بِرَبِّنَا أَحَدًا ﴿٢﴾

3. Waxaana Sarreeya sharafta Eebeheen, mana yeelan haweenay iyo ilmo midna.

وَأَنَّهُ تَعَالَى جَدُّ رَبِّنَا مَا اتَّخَذَ صَاحِبَةً وَلَا وَلَدًا ﴿٣﴾

4. Waxay Ahaayeen kuwannagii xumaa inay ku dhahaan hadallo xadgudub ah Eebe.

وَأَنَّهُ كَانَ يَفُولُ سَفِيهًا عَلَى اللَّهِ سَطَطًا ﴿٤﴾

5. Waxaana u Malaynaynay inuusan insi iyo Jinni Midna Eebe ku beensheegaynin.

وَأَنَّا ظَنَنَّا أَنْ لَنْ نَقُولَ الْإِنْسَ وَالْجِنَّ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا ﴿٥﴾

6. Waxayna ahaayeen kuwo insiga ka mid ah inay Magangalaan kuwo Jinniga ka mida markaasna u kordhiyeen kibir (iyo xad Gudub).

وَأَنَّهُ كَانَ رِجَالٌ مِّنَ الْإِنْسِ يَعُوذُونَ بِرِجَالٍ مِّنَ الْجِنِّ فَزَادُوهُمْ رَهَقًا ﴿٦﴾

7. Waxayna jinnigu u maleeyeen sidaad u malayseen inaan Eebe soo Bixinaynin Ruuxna.

وَأَنَّهُمْ ظَنُّوا كَمَا ظَنَنْتُمْ أَنْ لَنْ يَبْعَثَ اللَّهُ أَحَدًا ﴿٧﴾

Suuraddani waxay ka sheekayn khalqiga ka mida makhluuqaadka Eebe oo ah jinniga, mu'min iyo Gaalbana leh, waxaana jirtay inay koox ka mid ihi dhagaysteen akhriska Nabiga, waana in la rumeeoyo jiritaankooda, wax micna ah kuma jiro in la yidhaahdo ma aragno, maxaaayecelay imisaa wax aan la arkayn jira, ka warran naftaada iyo caqligaaga iyo dareenkaaga. Al-Jinn (1-7).

8. Waxaan Doonnay samada waxaana

وَأَنَّا لَمَسْنَا السَّمَاءَ فَوَجدْنَا مِلْمَتَ حَرَسًا

hellay iyadoo ka buuxda Ilaalin daran iyo danabyo.

شَدِيدًا وَسُهْبًا ⑧

9. Waxaana ahayn kuwo Fadhiista xageeda meelo si aan wax uga dhagay-sanno Ruuxiise Dhagaysta hadda wuxuu heli danabyo darban «la kulmi».

وَأَنَا كَذَّابٌ مِّنْهَا مَقْبَعٌ لِّلسَّمْعِ فَمَنْ يَسْتَمِعِ
الْآنَ يَحْدِثْهُ شَهَابًا مَّصْدًا ⑨

10. Mana ogin inay tahay shar lala Doonay dadka Dhulka ku nool ama Eebohood la Doonay hanuun (iyo khayr).

وَأَنَا لَا نَدْرِي أَشْرًا أُرِيدُ بِنِ فِي الْأَرْضِ أَمْ أَرَادِيهِمْ
رَبُّهُمْ رَشَدًا ⑩

11. Waxaa naga mid ah kuwo suuban iyo kuwo kaleba, waxaan nahay kooxa kala duwan.

وَأَنَا مِمَّا الصَّالِحِينَ وَمِمَّا دُونَ ذَلِكَ كَطَرِيقٍ فِدَا ⑪

12. Waxaanna Ognahay Inaannaan Eebe ku daalinkarin Dhulka Dhexdiisa, kuna Daalinaynin Cararid.

وَأَنَا ظَنَنْتَ أَنْ لَنْ نُنْجِرَ اللَّهَ فِي الْأَرْضِ
وَلَنْ نُنْجِرَهُ هَرَبًا ⑫

13. Markaan Maqallay hanuunkana waan Rumaynay, Ruuxii rumeeya Eebihiisana kama yaabo Nusqaan iyo Dulmi Midna.

وَأَنَا لَمَّا سَمِعْنَا الْهُدْيَ آمَنَّا بِهِ فَمَنْ يُؤْمِنُ بِرَبِّهِ
فَلَا يَخَافُ بَخْسًا وَلَا رَهَقًا ⑬

14. Waxaa naga mida Muslimiin iyo Kuwo xadgudbay, Ruuxiise islaama waa mid ku dadaalay hanuun.

وَأَنَا مِمَّا الْمُسْلِمِينَ وَمِمَّا الْقَاسِطُونَ فَمَنْ أَسْلَمَ
فَأُولَئِكَ نَجْرُوا رَبَّنَا ⑭

15. Kuwiise xadgudbay waxay ahaan Qoryaha Jahannamo.

وَأَمَا الْقَاسِطُونَ فَكَانُوا لِجَهَنَّمَ حَطَبًا ⑮

16. Hadday ku toosaan Dadku jidka (wanaagsan) waxaan ka waraabinlahayn biyo badan.

وَأَلْوَأَسَقُمْوَأَعْلَى الظَّرِيقَةِ لَا سَقِيْنَهُمْ مَّاءَ عَذَقًا ⑯

17. Imtixaan Dartiis, Ruuxii ka Jeedsada Xusidda Eebihiis wuxuu galin ca-daab daran.

لَيْفَتِيْهُمْ فِيْهِ وَمَنْ يُعْرِضْ عَنْ ذِكْرِ رَبِّهِ يَسْلُكْهُ
عَذَابًا مَّصْدًا ⑰

Cirka Eebbaa ilaaliyay, wax yeello iyo xumaana looma gaysankaro, waxaana jirtay in Jinnigu isku dayi jiray inuu dhagaysto hase ahaa-tee markii Quraanka xaqa ahu soo dagay yaa Eebe ka ilaa-liyay, Jinnigana saan soo sheegnay kuwo wanaagsan iyo kuwo xumba way leeyihiin, kuwoda wanaagsanna waxay qirteen inaan Eebe la daalin karin xaqayna raaceen, kooda unna uu noqon qoryaha Jahannama, dadakuna hadday toosnaadaan Eebbe wuu u nicmayn, haday jeedsadaanna wuu caddibi.

18. Masaajidda Eebaa iska leh ee ha kula baryina «caabudina» Eebe Cid kale.

وَأَنَّ الْمَسْجِدَ لِلَّهِ فَلَا تَدْعُوا مَعَ اللَّهِ أَحَدًا ﴿١٨﴾

19. Markuu istaagay Addoonkii Eebe (Nabigu) isagoo Caabudi Eebe waxay Jinnigu u dhawaadeen inay korkiisa is dulfuulaan.

وَأَنَّهُ لَمَّا قَامَ عَبْدُ اللَّهِ يَدْعُوهُ كَادُوا يَكْفُرُونَ
عَلَيْهِ لَيْدًا ﴿١٩﴾

20. Waxaad Dhahdaa Nabiyow waxaan uun Caabudi Eebahay lana wadaajin-mahayo cidna.

قُلْ إِنَّمَا أَدْعُوا رَبِّي وَلَا أَشْرِكُ بِهِ أَحَدًا ﴿٢٠﴾

21. Waxaad dhahdaa idiin ma hanto shar iyo khayr midna.

قُلْ إِنِّي لَا أَمْلِكُ لَكُمْ ضَرًّا وَلَا رَشَدًا ﴿٢١﴾

22. Waxaad Dhahdaa cidna igama korinayso Eebe, mana helayo isaga ka sakow Magangalyo.

قُلْ إِنِّي لَنْ يُجِيرَنِي مِنَ اللَّهِ أَحَدٌ وَلَنْ أَجِدَ مِنْ دُونِهِ
مُلْتَجًا ﴿٢٢﴾

23. Hase yeeshee waxaan hantaa Gaadhsiinta xaqa Eebe iyo Farriimihii-sa, Ruuxiise Eebe Caasiya iyo Rasuulkiisa waxaa u sugnaaday Naarta Jahannama isagoo ku waari Dhexdeeda.

إِلَّا لِنَفْسٍ مِنَ اللَّهِ وَرِيسَالَتِهِ وَمَنْ يَبْصُرْ اللَّهَ وَرَسُولَهُ
فَأِنَّ لَهُ نَارَ جَهَنَّمَ خَالِدًا فِيهَا أَبَدًا ﴿٢٣﴾

24. Markay Gaaladu Arkaan waxa loo yaboohi waxay ogaan cidda Gargaarihiisu tabaryaryahay tirana yar.

حَتَّىٰ إِذَا رَأَوْا مَا يُوعَدُونَ فَسَيَعْلَمُونَ مَنْ أَضَعُفٌ
نَاصِرًا وَأَقْلَبَ عَدَدًا ﴿٢٤﴾

25. Waxaad Dhahdaa ma ogi inuu Dhawyahay waxa la idiinku Gooddin ama Eebahay waqti u yeeli.

قُلْ لَنْ أَدْرِي أَلْقَابُ آبِئَاتٍ مَا تُوعَدُونَ أَمْ يَجْعَلُ لَهُ رَبِّي أَمَدًا ﴿٢٥﴾

26. Eebaa og waxa Maqan, umana muujiyo waxaa maqan Ruuxna.

عَلَيْهِ الْغَيْبُ فَلَا يُظْهِرُ عَلَىٰ غَيْبِهِ أَحَدًا ﴿٢٦﴾


27. Marka laga Reebo cidduu ka raalli Noqday oo Rasuul ah. Isagoo hor iyo gadaalba ka ilaalin.

إِلَّا مَنْ أَرَادَ أَنْ يَنْتَهِبَ مِنْ رَسُولِ قَوْمِهِ، يَسْأَلُكَ مِنْ بَيْنِ
يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِ رَصَدًا ﴿٢٧﴾

28. Si Eebe u ogaado inay Gaadh-siiyeen Fariimihii Eebhood, Eebana waa koobay waxa Agtooda ah wayna u tirakoobanyihiin wax walba.

لِيَعْلَمَ أَنْ قَدْ أَبْغُوا رِسَالَتِي رِهْمًا وَأَحَاطَ بِمَا
لَدَيْهِمْ وَأَحْصَىٰ كُلَّ شَيْءٍ عَدَدًا ﴿٢٨﴾

hanannin, wax Eebe ka soo hadhay oo uu magangalina uusan jirin, hasayeeshee uu hanto xaqa iyo fariinta Eebe oo uu dadka gaadhsiyo, ruuxiise Eebe iyo Rasuulka caasiya wuxuu gali Naar, gargaarana ma helo, waxa maganna Eebe umbaa og inuu dhawyahay iyo in kale iyo goortuu iman, hasayeeshee Eebe Rasuulladiisa uu ka raalli noqday umbuu waxyi wax ku ogaysiiyaa isagoo ilaalin si ay u gaadhsiyaan fariinta Eebohood, Eebana wax walba wuu koobay. Qataada wuxuu yidhi yuhuud iyo nasaara waxay ahaayeen kuwii Eebe wax la wadaajiya, markaasaa Eebe faray Nabiga in Eebe kaliya la caabudo. Al-Jinn (18-28).



Suurat Al-Muzzammil

سُورَةُ الْمُزَّمِّلِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Nabiga) Isduuduubayow.

يٰٓأَيُّهَا الْمُدَّثِّرُ ١

2. Istaag habeenka (Tuko) wax yar Mooyee.

فُوَيْلًا ٢

3. Nuskiisa tuko ama ka nusqaami wax yar.

نَضْفَهُ وَأَنْقَضَ مِنْهُ قَلِيلًا ٣

4. Ama ka badi. Quraanka u akhri si fiican.

أَوْزِدْ عَلَيْهِ وَرَاقِلُ الْفَرَىٰ أَنْ تَرْتِيلًا ٤

5. Annagaa Kugu Dajin Hadal Culus (wayne).

إِنَّا سَلَفَىٰ عَلَيْكَ قَوْلًا قَلِيلًا ٥

6. Habeenka Saacadihiisa. (oo la tuka-do) yaa ku daran khushuucda Aadna u toosan.

إِنْ نَاشِئَةَ اللَّيْلِ هِيَ أَشَدُّ وَطْأًا وَأَقْوَمُ قِيلًا ٦

7. Maalintii waxaa kuu sugnaaday shaqa Dheer.

إِنْ لَكَ فِي النَّهَارِ سَبْحًا طَوِيلًا ٧

8. Magaca Eebana xus cibaadadiisana u go'.

وَأَذْكُرْ اسْمَ رَبِّكَ وَتَبَتَّلْ إِلَيْهِ تَتَسَبَّلًا ٨

9. Qorrax ka soobax iyo u Dhacba Eebaa iska leh, isaga mooyee ilaah kale xaq luguma caabudo ee ka yeelo wakiil (la cuskado).

رَبُّ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ فَاتَّخِذْهُ وَكِيلًا ٩

10. Kuna Samir waxay sheegi gaaladu, si Quruxsanna uga hijroo (iskaga tag).

وَأَصْبِرْ عَلَىٰ مَا يُوْرُونَ وَاهْجُرْهُمْ هَجْرًا جَمِيلًا ١٠

11. Isu kaanna daa aniga iyo kuwa Beeniyay xaq ee Nicmaysan wax yarna Sug.

وَذَرْنِي وَالْمُكَذِّبِينَ أُولِي النَّعْمَةِ وَمَهَلْهُمْ قَلِيلًا ١١

12. Agtannada waxaa ah caddibaad iyo Naarta Jaxiimo.

إِنْ لَدَيْنَا أَنْكَالٌ وَجَحِيمًا ١٢

13. Iyo cunno lagu Margado iyo Ca-daab daran.

وَطَعَامًا إِذَا غَضَبَهُ وَعَدَابًا لِيَمِينًا ﴿١٣﴾

14. (waxay ku dhici Arrintaasu) Maa-linta Dhulka iyo Buuruhu Gilgilan, Buuruhuna ay noqon Tamuux socda^(*).

يَوْمَ تَرْجُفُ الْأَرْضُ وَالْجِبَالُ وَكَانَتِ الْجِبَالُ كَيْبًا
مَهِيلًا ﴿١٤﴾

Nabiga «Naxariis iyo Nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee» wuxuu Eebe faray inuu xaqa Gaadhsiyo dadka, cibaadadana badiyo gaar ahaan habeenkii wuxuuna ku manaystay inuu ku dajiyay Quraan Sharaf leh, wuxuuna faray inuu badiyo xuska Eebe iyo cibaadadiisa, maxaa yeelay adduunka Eebaa iska leh ilaahaan isaga mooyee ilaah kale xaqlagu caabudo ahaynna ma jiro, waxaa kaloos faray inuu Eebe tala saarto dhibkana u adkaysto gaaladanna ka hijroodo isuna daayo iyaga iyo Eebe wax yarna sugo, maxaa yeelay Eebe agtiisa yaa cadaab iyo ciqaab u taalla gaalada maalinta qiyaame.

Al-Muzzammil (1-14).

(*) bacaad daadanaya oon Lugta celinayn (dib u eegaha).

15. Annagaa idiin dirray Rasuul mark-haati ah, sidaan ugu dirray fircoonba Rasuul.

إِنَّا أَرْسَلْنَا إِلَيْكَ رَسُولًا شَهِدًا عَلَيْكَ كَمَا أَرْسَلْنَا إِلَىٰ
فِرْعَوْنَ رَسُولًا ﴿١٥﴾

16. Fircoonba wuu Caasiyay Rasuulkii (Nabi Muuse).

فَصَبَّحَ فَرَعْوَنَ الرَّسُولَ فَأَخَذَتْهُ أَحَدًا وَبَيْلًا ﴿١٦﴾

Fircoonba waxaan ku Qabannay qa-basha Daran.

17. Ee seebaad Gaalooy uga dhawrsa-naysaan Caddibaadda Maalinta qiyaame ee caruurta Cirroole ka Yeeli Haddaad Gaalawdaan.

فَكَيْفَ تَسْفُحُونَ إِنْ كَفَرْتُمْ فَمَا يَجْعَلُ الْوِلْدَانَ
شِيْبًا ﴿١٧﴾

18. Samaduna Maalintaas Darteed ay la Dildillaaci Ballanqaadka Eebana waa wax Dhici.

السَّمَاءِ مُنْفَطِرٍ بِهِ كَان وَعْدُهُ مَفْعُولًا ﴿١٨﴾

19. Aayadahani Waa waano, Ee Ruuxii Doona Eeba xaggiisa jid ha uga yeesho.

إِنْ هَذِهِ تَذَكُّرَةٌ فَمَنْ شَاءَ اتَّخِذْ إِلَىٰ رَبِّهِ
سَبِيلًا ﴿١٩﴾

Diridda rasuulku ma aha wax gaar ku ahayd nabiga, ee waxaa jiray in Eebe diray nabiyoy iyo rasuullo badan sidii nabi Muusihii fircoon loo diray oo is kibriyay oo Beeniyay Eebana ciqaab daran ciqaabay, ruuxii wax Garad ahe waa inuu waano qato una darbado maalinta qiyaame ee dhibka badan, Eebe Xaggiisana jid fiican uga samaysto. Al-Muzzammil (15-19).

20. Eebahaa wuxuu ogyahay Nabiyow inaad tukatid wax ka yar habeenka saddex Meelood laba iyo Badhkiis iyo saddex meelood meel, iyo in koox ka

*إِنَّ رَبَّكَ يَعْلَمُ أَنَّكَ تَقُومُ أَدْنَىٰ مِنْ ثُلُثِي اللَّيْلِ وَنِصْفَهُ وَثُلُثَهُ
وَطَافُفَهُ مِنَ الَّذِينَ مَعَكَ وَاللَّهُ بِقَدْرِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ عَاطِمٌ

mida kuwa kula jira ay tukato, Eebana waa u qadaranyahay Habeenka iyo Maalintuba, wuxuuna Ogyahay inaydaan Koobi karin, wuuna Idinka too bad Aqbalay ee Akhriya wixii idiin Fududaada oo quraan ah, wuxuu Eebe ogyahay inay idin ka mid Noqon kuwa Buka iyo kuwo safri iyagoo dooni Khayrka Eebe iyo kuwo u dagaallami Jidka Eebe ee akhriya wixii idiin Fududaada oo Quraan ah, Salaaddana ooga Zakadana Bixiya Eebana wax wanaagsan daysada Waxaad Naftiinna u hormarsataan oo Khayr ahna waxaad ka ogaandoontaan kana Heleysaan Eeba Agtiisa Isagoo khayr ah iyo Ajri wayn, ee Eebe Dambi dhaaf waydiista waa Dambi Dhaafe Naxariiste.

لَنْ نُخْصِمَهُ فَتَابَ عَلَيْكَ فَاقْرَأْ وَأَمَّا تيسَّرَ مِنَ الْقُرْآنِ
 عَلِمَ أَنْ سَيَكُونُ مِنْكَ مَرَضًا وَعَآخِرُونَ يَضُرُّونَ فِي
 الْأَرْضِ يَتَّبِعُونَ مِنْ فَضْلِ اللَّهِ وَعَآخِرُونَ يَفْتَلُونَ فِي
 سَبِيلِ اللَّهِ فَاقْرَأْ وَأَمَّا تيسَّرَ مِنْهُ وَأَقِمُوا الصَّلَاةَ وَعَآوُ
 الْزُكُورَةَ وَأَقْرِضُوا اللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا وَمَا تَقْدِمُوا إِلَّا أَنْفُسِكُمْ مِنْ
 خَيْرٍ يَجِدُوهُ عِنْدَ اللَّهِ هُوَ خَيْرًا وَأَعْظَمَ أَجْرًا وَأَسْتَغْفِرُوا اللَّهَ
 إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴿٢٠﴾

Eebe waa ogyahay camalkenna iyo dhaqahaqaaqenna habeen iyo dharaarba, waxaana laga rabaa ruuxa mu'minka ah inuu Eebe ku Xidhnaado oo toobad keeno, quraankana akhriyo, camalkiisuna noqdo mid habaysan oon ahayn mashaqo iyo dhibaato, illeen waxaa lagu shuqloomi karraa, jirro iyo tijaaro xalaal ah, waase in Eebe si joogta ah loo caabudo, salaadda, Zakada iyo khayrkana la hormarsadaa si wanaag, ajri iyo dambi dhaaf Eebe agtiisa looga hella. Al-Muzzammil (20).



Suurat Al-Muddathir

سُورَةُ الْمُدَّثِّرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. (Nabiga) Isdadayow.
2. Istaag oo dig.
3. Eebahaana waynee.
4. Dharkaagana daahiri.
5. Xumaantana ka hijroo (iyo Sanaamyada).
6. Hana ku mannaysan Adoo Badsan (waxaad Bixisay).
7. Eebahaa Dartiisna u Samir.
8. Marka Suurka (qiyaame) la Afuufo.
9. Maalintaasu waa maalin ku Daran.
10. Gaalada oon u Fududayn.
11. Isukaanna daa Aniga iyo kaan Abuuray isaga oo kaligiisa.
12. Una yeelay Xoolo Badan.
13. Iyo Wilaal Jooga oo «Darban».
14. Aan una waasiciyay Risqiga.
15. Oo haddana sii damci inaan u Badiyo.
16. Saas maaha, ee kaas wuxuu diiday Aayaadkannaga.
17. Waxaana ku kallifi (Ku Dhibi) Cadaab daran.

يَأْتِيهَا الْمُدَّثِّرُ ①

فُؤَادًا نَدِيرًا ②

وَرَبِّكَ فَكَبِيرًا ③

وَرَبِّكَ فَطَهِيرًا ④

وَالرُّجُوعَ فَأَهْجَرًا ⑤

وَلَا تَحْنَنَّ لِلْمُكَذِّبِينَ ⑥

وَرَبِّكَ فَأَصِيرًا ⑦

فَإِنَّا نَعْرِفُ فِي الْآفَاقِ ⑧

فَذَلِكَ يَوْمَئِذٍ يَؤُوسٍ عَسِيرٍ ⑨

عَلَى الْكٰفِرِينَ عَذَابٌ عَسِيرٌ ⑩

ذَرْنِي وَمَنْ خَلَقْتُ وَحِيدًا ⑪

وَجَعَلْتُ لَهُ مَا لَمْ مَدُّوهُ ⑫

وَبَيْنَ شُهُودًا ⑬

وَمَهَّدْتُ لَهُ تَمْهِيدًا ⑭

فَتَظْمَعُ أَنْ يَزِيدَ ⑮

كَلَّا إِنَّهُ كَانَ لِآيَاتِنَا عَمِيدًا ⑯

سَاءَ رَهَقًا صَعُودًا ⑰

Waxaa sugnaatay in rasuulku (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeclee) markuu waxyigu ku billawday uu is daday isagoo naxsan, markaas Eebe faray inuu kaco dadkana u digo, Eebana wayneeyo nadaafadana ku dadaalo, Xumaantana ka fogaado, wuxuu bixiyana uusan sheegsheegin, dar Eebana u

samro, mu'minka dhabta ahna saassaa laga rabaa, markase qiyaamadu timaaddo gaalo waxay la kulmi dhib iyo halaag, mana habboona in Eebihii ku abuuray ee kuu nicmeeyay eed waliba ka doonayso kordhin aad ka gaalawdid xaqiisana ka madax adaygtid, sida gaalka aayaduhu tilmaameen. Al-Muddathir (1-17).

18. Gaalkaasu wuu Fikiray waxbuuna Goostay.

إِنَّهُ فَكَّرَ وَقَدَّرَ ﴿١٨﴾

19. Waxaana loo Lacnaday Siduu wax u goostay.

فَقَتِلَ كَيْفَ قَدَّرَ ﴿١٩﴾

20. Haddana waxaa loo Lacnaday siduu wax u goostay.

تُوقَّتِلَ كَيْفَ قَدَّرَ ﴿٢٠﴾

21. Kadib wuxuu Eegay (si uu Quraanka u wax yeeleeyo).

تُنْظَرُ ﴿٢١﴾

22. Wuuna Waji Macbuusay oo Uruuriyay.

تُرْعَسُ وَيَسَّرُ ﴿٢٢﴾

23. Markaasuu jeedsaday oo is Kibriyay.

تُرَادَّبِرُ وَأَسْتَكْبِرُ ﴿٢٣﴾

24. Isagoo Dhihi quraankani ma aha waxaan sixir la soo Guuriyay ahayn.

فَقَالَ إِن هَذَا إِلَّا سِحْرٌ يُؤْتَى ﴿٢٤﴾

25. quraankani ma aha waxaan hadal Bashar ahayn.

إِن هَذَا إِلَّا اقْوَالُ الْبَشَرِ ﴿٢٥﴾

26. waxaannu galin kaas (Naarta) saqara.

سَأْصِلِيهِ سَقَرًا ﴿٢٦﴾

27. Ma taqaannaa Naarta Saqara.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا سَقَرُ ﴿٢٧﴾

28. Hilib iyo laf midna ma Reebto.

لَا تَنْفِقِي وَلَا تَنْدُرِي ﴿٢٨﴾

29. waxayna Doorisaa jidhka (oy Gubtaa).

لَوْاحَةٌ لِلْبَشَرِ ﴿٢٩﴾

30. waxaana kor jooga (ka shaqeeya) sagaal iyo toban malag (ama saf).

عَلَيْهَا تِسْعَةَ عَشَرَ ﴿٣٠﴾

Xaqoo la raaco yaa haboon, Ruuxiise ka Horyimaada oo Xumaan iyo dhagar maamula wuxuu la kulmi dhibaato iyo guul darro, sidii ku dhacday gaalkii waliid binu muqiira ahaa ee dulloobay laguna dilay dagaalkii waynaa ee b adar, Eebana wuxuu ugu goodiyay kaas iyo wixii camalkiisa fala naar daran oo laf iyo lud midna aan reebaynin, malla'igtuna waa junuudda Eebe ee naarta ka shaqaysa si loo ciqqaabo dambilayaasha, Eebe ha naga koriyeec. Al-Muddathir (18-30).

31. Ugama Aannaan yeelin naarta kuwa ka shaqeeya malaa'ig, tirana وَمَا جَعَلْنَا أَحْسَبَ النَّارِ إِلَّا مَلَائِكَةً وَمَا جَعَلْنَا عِدَّةَهُمْ إِلَّا

uma aannaan yeelin inay Gaaladu ku fidnoobaan Mooyeen, iyo inay yaqiin sadaan kuwa Kitaabka la siiyay, iyo inay kordhistaan kuwii xaqa Rumeeyay Iimaan, ayna shakiyinna kuwii Kitaabka la siiyay iyo Mu'miniintu, iyo inay Dhahaan kuwa Qalbiga ka buka iyo Gaaladu Eebe muxuu uga Jeedaa Tu-saalahan, saasaa Eebe u dhumiya Ruuxuu Doono, una Hanuuniyaa Ruuxuu Doono, wax og junuuda Eebe oon isaga Ahaynna ma jiro, waxan la soo Sheegayna ma aha waano Dadka Mooyee.

32. Waxaa sugan dayaxa ku Dhaartaye.

33. Iyo Habeenku Markuu Jeedsado.

34. Iyo Subaxu makuu iftiimo.

35. Ee Naarta Saqara waa waxyaalaha waawayn Midkood (Balaayooyinka).

36. Waana Digniinta Dadka.

37. Ruuxii Doona inuu Hormaro, iyo Ruuxii Doona inuu dib u dhaco, (waa Loodigay).

Eebe wuxuu doonuu falaa, naarta cidda ka shaqayna wuxuu ka dhigay malaa'ig, si ciddii doontana ay u hanuunto ciddii doontana u dhunto, junuudda Eebeheen iyo ciidammadiisana isaga umbaa og, aayadaha la soo sheegayna waa digniinta dadka, Eebana wuxuu ku dhaartay dayaxa, habeenku markuu jeedsado, subaxu markuu iftiimo in Naarta Saqara ay ka midtahay Balaayooyinka waawayn iyo digniinta dadka ruuxii doona inuu hormaro iyo kii doona inuu dib u dhacaba. Kitaabu-Baxar waxaa lagu sheegay in horumarka iyo dibu dhaca loola jeedo khayrkoo lagu hormaro iyo isagoo laga dib dhaco. Ibnu cabbasna wuxuu yidhi Ruuxii doona ha raaco daacada Eebe, kii doonana ha ka dib dhaco. Al-Muddathir (31-37).

38. Naf walba waxay u xidhantahay waxay Camal fashay.

39. Hase yeeshee kuwa Midigta mari (Ehlu khayrka).

40. Waxay gali Jannooyin, waxayna iswaydiin.

41. Dambiilayaasha.

فَتَنَّا الَّذِينَ كَفَرُوا لِيَسْتَيْقِنَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ وَيَزِدَّ الَّذِينَ آمَنُوا إِيمَانًا وَلَا يَرْتَابَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ وَالْمُؤْمِنُونَ وَلِيَقُولَ الَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٌ وَالْكَافِرُونَ مَاذَا أَرَادَ اللَّهُ بِهَذَا مَثَلًا كَذَلِكَ يُضِلُّ اللَّهُ مَن يَشَاءُ وَيَهْدِي مَن يَشَاءُ وَمَا يَعْلَمُ جُودَ رَبِّكَ إِلَّا هُوَ وَمَا هِيَ إِلَّا ذِكْرَى لِلْبَشَرِ ﴿٣١﴾

كَلَّا وَالْقَمَرِ ﴿٣٢﴾

وَاللَّيْلِ إِذَا دُبِرَ ﴿٣٣﴾

وَالصُّبْحِ إِذَا تَنَفَّرَ ﴿٣٤﴾

إِنهَا إِلَّا خِذْيُ الْكَبِيرِ ﴿٣٥﴾

نَذِيرٌ لِلْبَشَرِ ﴿٣٦﴾

لَمَن شَاءَ مِنكُمْ أَن يَتَقَدَّمَ أَوْ يَتَأَخَّرَ ﴿٣٧﴾

كُلُّ نَفْسٍ بِمَا كَسَبَتْ رَهِيْنَةٌ ﴿٣٨﴾

إِلَّا الْأَحْقَابَ الْيَمِيْنِ ﴿٣٩﴾

فِي حَتِّ يَنْسَاءُ لَوْنٌ ﴿٤٠﴾

عَنِ الْمَجْرَمِيْنَ ﴿٤١﴾

42. Iyagoo ku dhihi Maxaa idin Galiyay Naarta saqara. مَاسَلَكُكُمْ فِي سَقَرٍ ﴿٤٢﴾
43. Waxayna ugu Jawaabi ka mid ma'aannaan ahayn kuwa Tukada. قَالُوا لَوْلَا نُنَّاكَ مِنَ الْمَصْلُوبِينَ ﴿٤٣﴾
44. Mana aannaan ahayn kuwa Quu-diya Miskiinka. وَلَوْلَا نُنَّاكَ نَطَعُمُ الْمَسْكِينِ ﴿٤٤﴾
45. Waxaana ahayn kuwa la dhumbada kuwa xumaanta Dhumban. وَكُنَّا نَحْمُضُ مَعَ الْفَاطِيضِينَ ﴿٤٥﴾
46. Waxaana ahayn kuwa beeniya Maalinta Abaalmarinta (Qiyaamada). وَكُنَّا نَكْذِبُ بِيَوْمِ الدِّينِ ﴿٤٦﴾
47. Ilaa ay Dhabtu Nooga Timaado (Geeridu). حَقِّقْنَا أَتْنَا الْيَقِينَ ﴿٤٧﴾
48. Ma anfacyaso kuwaas Shafeecada kuwa Shafeeca. فَاتَفَعَّلْهُمْ سَفْعَةُ الشَّفِيعِينَ ﴿٤٨﴾
49. Maxaase u sugnaaday oy waanada uga Jeedsadaan. فَاتَاهُمْ عَنِ التَّذْكَرَةِ مُعْرِضِينَ ﴿٤٩﴾
50. ood u moodaa Dameero Diday. كَأَنَّهُمْ حُمْرٌ مُّسْتَفِرَّةٌ ﴿٥٠﴾
51. oo ka Cararay libaax. فَرَّتْ مِنْ قَسْوَرَةٍ ﴿٥١﴾
52. Haddana wuxuu dooni midkasta oo ka mida warqado Qoran (kitaab). بَلْ يُرِيدُ كُلُّ امْرِئٍ مِّنْهُمْ أَنْ يُؤْتَىٰ صُحُفًا مُّثَنَّنَةً ﴿٥٢﴾
53. Saas ma aha Ee kama yaabayaan Aakhiro. كَلَّا بَلْ لَا يَخَافُونَ الْآخِرَةَ ﴿٥٣﴾
54. Waxaa sugan in Quraanku waana yahay. كَلَّا إِنَّهُ تَذَكُّرَةٌ ﴿٥٤﴾
55. Ruuxii Doona yaana waantoobi. فَمَنْ شَاءَ ذَكُرْهُ ﴿٥٥﴾
56. Mana Waantoobayaan in Eebe Doona Mooyee, Eebana wuxuu mutaa in laga Dhawrsado, wuxuuna Ehel u yahay inuu Dambi Dhaafo. وَمَا يَذْكُرُونَ إِلَّا أَنْ يَشَاءَ اللَّهُ هُوَ أَهْلُ التَّقْوَىٰ وَأَهْلُ الْمَعْرِفَةِ ﴿٥٦﴾

Naf walba waxaa laga abaal marn waxay kasbatay, khayr iyo sharba, hase yeeshee ehlu janunhu waxay waydiin ehlu naarka waxa naarta galiyay, waxayna ugu jawaabi: inayna tukan jirin, miskiinna quudin jirin, xumaantana tiimban jireen, qiyaamadan beenin jireen inta dhabtu uga timaaddo, kuwaas shafeeco wax uma tarto, maxaayecelay Xaqay ka jeedsadeen iyagood moaddo dameero bahal ka cararay, haddana midkastoo ka mida gaalada wuxuu dooni in warqad qoran samada looga soo dajiyo, dhabahaantuse waa inayna aakhiro ka yaabaynin, Quraankuna waana yahay, ruuxii doonana waantoobi, awoodana Eebaha in laga cabsado muta dambi dhaafna ehel u ah yaa iska leh., Al-Muddaththir (38-56).

Suurat Al-Qiyaamah



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaaran maalinta qiyaame.

لَا أَقِيمُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ①

2. Waxaan ku dhaaran (oo kale) nafta Dagaasha (Saaxiibkeed) (Ee waa la idin soo bixin).

وَلَا أَقِيمُ بِالنَّفْسِ الْوَالِدَةِ ②

3. Ma wuxuu u maleeyay Dadku inaan ku kulminaynin lafihiisa.

أَيَحْسَبُ الْإِنْسَانُ أَنْ يُجْمَعَ عَظَامُهُ ③

4. Saas ma aha ee waan karraa inaan sinno (soona Celinno) Farihiisa.

بَلَى قَدَرِينَ عَلَّ أَنْ تُسَوَّى بَنَانُهُ ④

5. Wuxuuse Dooni Dadku inay ka Gaaloobaan waxa ka horreeya.

بَلْ يُرِيدُ الْإِنْسَانُ لِيَفْجُرْ أَمَامَهُ ⑤

6. Wuxuu waydiin waa Goorma Maalinta Qiyaame.

يَسْأَلُ أَيَّانَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ⑥

7. Markase Araggu Wareero (Taagmo).

فَإِذَا بَرِقَ الْبَصَرُ ⑦

8. Dayuxuna Madoobaado.

وَحَسَفَ الْقَمَرُ ⑧

9. Lana Kulmiyo Qorraxda iyo Dayaxa.

وَجُمِعَ الشَّمْسُ وَالْقَمَرُ ⑨

10. Wuxuu Dhihi Dadku Maalintaas xagee loo cararaa.

يَقُولُ الْإِنْسَانُ يَوْمَئِذٍ أَيْنَ الْمَفْرُ ⑩

11. Saas ma aha ee ma jiro wax la magan Galo (Eebe Mooyee).

كَلَّا لَا وَزَرَ ⑪

12. Xagaa Eebahaa yaana Maalintaas loo ahaan.

إِلَىٰ رَبِّكَ يَوْمَئِذٍ الْمُسْتَقَرُّ ⑫

Suuraddan waxaa lagu magacaabaa suuratul-qiyaamah, waxayna ka warrami Qiyaamada iyo sida Eebe dadka u soo kulmin, iyo madax adayga gaalada iyo siday u beenin abaalmarinta, maxayse u tari waxaa iman maalin araggu taagmi, dayuxuna madoobaan, qorraxdana uu la kulmi, dadkuna ay odhan iyagoo calaacali xagee loo cararaa maanta, dhabtuse waxaan Eebe ahayn oo lamagan galo ma jiro maalintaas raggiisaana loo ahaan. Al-Qiyaamah (1-12).

13. Waxaa looga warrami dadka Maalintaas wuxuu hormarsaday iyo wuxuu Dibmarsaday.

يُنَبِّئُ الْإِنْسَانَ بِمَا قَدَّمَ وَأَخَّرَ ﴿١٣﴾

14. Ruux walbana Naftiisa isagaa ku maragfuri.

بَلَى الْإِنْسَانُ عَلَى نَفْسِهِ بَصِيرَةٌ ﴿١٤﴾

15. Si kasta Hadduu u cudurdaartana (wax uma tarto).

وَلَوْ أَنَّ لِلْمُحَادِثِينَ ﴿١٥﴾

16. Ha Dhaqaajinin Nabiyow Carrabka inaad Quraanka ku Dagdagto (Akhriskiisa).

لَا تَحْرِيكَ بِهِ سَانَكَ لِتَعْجَلَ بِهِ ﴿١٦﴾

17. Annagaa Laabtaada ku kulmin kuuna Akhriyi.

إِنْ عَلِمْنَا لَمَعَةَ نُورٍ وَأَنَّهُ ﴿١٧﴾

18. Ee Markaan akhrino Raac Akhriskiisa.

فَإِذَا قَرَأْتَهُ فَاتَّبِعْ قُرْآنَهُ ﴿١٨﴾

19. Annagaana isasaarray Cadaayntiisa.

ثُمَّ إِنْ عَلِمْنَا لَمَعَةَ نَارٍ ﴿١٩﴾

20. saas ma aha Ee waxaad Jeceshihiin Dadow tan soo Dagdagaysa (Adduunyada).

كَلَّا بَلْ تُحِبُّونَ الْعَاجِلَةَ ﴿٢٠﴾

21. Waxaadna ka tagaysaan aakhiro.

وَتَذُرُونَ الْآخِرَةَ ﴿٢١﴾

22. Wajiyaal Maalintaas way ifi.

وَجُودٌ بِوَمَدٍ تَأْوِيهِ ﴿٢٢﴾

23. Eebeheedna way Eegi.

إِلَىٰ رِيحٍ مَّا تَطُورُ ﴿٢٣﴾

24. Wajiyaalna Maalintaas way ka-duudsami.

وَجُودٌ بِوَمَدٍ بِأَمْرٍ ﴿٢٤﴾

25. Waxayna hubtaa in lugu fali Balaayo.

تَنْظُرُونَ أَنْ يُفْعَلَ بِهَا فَاقْتَرُوا ﴿٢٥﴾

Eebe wax ka qarsoon ma jiro, cidwalbana wuxuu uga warrami wuxuu falay, ruux walbana isagaa naftiisa ku marag furi, wax cudurdaarana lagama aqbalo, Eebana wuxuu faray Nabigiisa inuusan ku dagdagin akhriska quraanka marka waxyigu ku dagayo, maxaa yeelay Eebaa ballan qaaday inuu Quraanka kulmiyo Nabigana u akhriyo una cadeeyo, waxaase dhaba in dadku ka jeclaa day aakhiradiisa adduunyo (inta Eeba doona mooyee), Maalinta Qiyaamana waxaa loo qaybsami cid faraxsan oo Eeba arki, iyo cid naxsan oo balaayo sugi. (Xasan Al-Bisri wuxuu yidhi Ilaahay bay fiirin, wayna mudataa inay ifto iyadoo Eeba fiirin). Al-Qiyaamah (13-25).

26. Saas ma aha ee markay naftu gaadho Dhuunta (Waqtiga Geerida).

كَلَّا إِذَا بَلَغَتِ التَّرَاقِيَ ﴿٢٦﴾

27. Oo la Dhoho yaa ku tufi.

وَيَقِيلُ مِنَ الرَّاقِي ﴿٢٧﴾

28. Oo uu Yaqiinsado inuu Dhiman. وَوَظَنَ أَنَّهُ الْفِرَاقُ ٢٨
29. Oo labada Dhudhun isku marmaan (sakaraad Dartiis). وَأَلْقَتِ السَّائِي بِالسَّائِي ٢٩
30. Eebahaa Xagiisaa la aadi. إِلَىٰ رَيْكِ يَوْمَئِذٍ الْمَسَاقُ ٣٠
31. Mase Rumaynin Gaalku Xaqa mana tukannin. فَلَا صَدَقَ وَلَا هَيَّأَ ٣١
32. Laakiin wuu Beeniyay wuuna Jeed-saday. وَلَكِنْ كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ٣٢
33. Wuxuuna aaday Ehelkiisii isagoo kibirsan. فُرْزَهُبَ إِلَىٰ أَهْلِهِ بِسَمَطٍ ٣٣
34. Halaag Buuse Mutaa. أَوَّلَ لَكَ فَأَوْلَىٰ ٣٤
35. Haddana Halaagbuu Mutaa. ثُمَّ أَوَّلَ لَكَ فَأَوْلَىٰ ٣٥
36. Ma wuxuu u maleeyay Dadku in looga tagi Bilaash (Dan la'aan). أَيْحَسِبَ الْإِنْسَانُ أَن يُتْرَكَ سُدًى ٣٦
37. Miyuusan ahayn Dhibic mani ah oo la Dhibciyo. أَلَمْ يَكُن لُّطْفَةً مِنِّي يَمْعَىٰ ٣٧
38. Markaas Noqota xinjir oo Eebe Abuuro Ekeeyana. كُنَّكَانَ عَاقِبَةً فَخَلَقَ فَهَسَوَىٰ ٣٨
39. Kana yeelo Labadii Nooc lab iyo Dhaddig. فَجَعَلَ مِنْهُ الزَّوْجَيْنِ الذَّكَرَ وَالْأُنثَىٰ ٣٩
40. Eebaha Saas kara miyuusan Awoodin inuu soo Nooleeyo wixii Dhintay. أَلَيْسَ ذَلِكَ بِقَدِيرٍ عَلَىٰ أَن مَّجِيئِ الْمَوْتِ ٤٠

Geeridu waa xaq, waase arrin daran, wuxuuna Eebe innooga warramay Sakaraadka iyo dhibaataadiisa, iyo inaan qaraabo iyo cidna wax u tari karayn Eeba xaggiisana loo ahaan, taasoy waajibtahay in loo darbado, mase habboona in la maro waddadii Abii-jahal iyo wixii la mid ahaa, een xaqa rumaynin cibaadana falin, balse beeniyay kana jeedsaday kibir iyo islawaynina ehelkiisa ugu dhexnoolaa halaagbuuse mutaa. miyuusane Dadku ogayn in waajib laga rabo iyo xaqoo la raaco iyagoo xusuusan waxa Eebe ka abuuray iyo siduu u ekeeyay Rag iyo Haweenna ka dhigay, taasoo ku tusin awoodda Eebe iyo inuu soo kulmin wixii dhintay si uu u abaal mariyo dhammaantood. Al-Qiyaamah (26-40).



Suurat Al-Insaan

سُورَةُ الْإِنْسَانِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Dhab ahaan waxaa dadka soo maray waqti wax la sheego uusan ahayn (uusan jirin).

هَلْ أَتَى عَلَى الْإِنْسَانِ حِينٌ مِّنَ الدَّهْرِ لَوِ يَكُنْ شَيْئًا مَّذْكُورًا ﴿١﴾

2. Annagaa ka abuuray dadka dhibic isku Dheehan, Imtixaan Dartiis, waxaana ka yeellay wax maqle wax arka ah.

إِنَّا خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ مِن طُفْئَةِ أَمْسَاجٍ تَبْيِلُهُ جَعَلْتَهُ سَمِيمًا بَصِيرًا ﴿٢﴾

3. Annagaa Dadka tusinnay Jidka, waxayna Noqdeen mid Shukriya (mahadiya) iyo mid Gaalnimo Badan.

إِنَّا هَدَيْنَاهُ السَّبِيلَ إِمَّا شَاكِرًا وَإِمَّا كَفُورًا ﴿٣﴾

4. Annagaa u darabnay Gaalada silsilado iyo katiinado iyo naarta Saciira.

إِنَّا أَعْتَدْنَا لِلْكَافِرِينَ سَلَاسِلًا وَأَغْلَاقًا وَسَعِيرًا ﴿٤﴾

5. kuwa Baarriyiinta ah waxay ka cabbi weel Buuxa oo lagu Dheehay kaafuur.

إِنَّ الْأَبْرَارَ يَشْرَبُونَ مِن كَأْسٍ كَانَ مِزَاجُهَا كَافُورًا ﴿٥﴾

6. Waa il ay ka Cabbaan Addoomada Eebe, ayna ujiidaan say Doonaan.

عَيْنًا يَشْرَبُ بِهَا عِبَادُ اللَّهِ يُفَجِّرُونَهَا تَفْجِيرًا ﴿٦﴾

7. Wayna oofiyaan Nadarka, waxayna ka yaabi maalin sharkeedu fidi (qiyaa-mada).

يُوفُونَ بِالَّذِذْرِ وَيَخَافُونَ يَُوْمًا كَانَ شَرُّهُ مُسْتَطِيرًا ﴿٧﴾

8. Waxayna Quudiyaan iyagoo jecel miskiinka Agoonka iyo kan xabbisan (Dhibban).

وَيُطْعَمُونَ أَلْطَافًا عَلَىٰ حَيْثُ مَسَّكِنَا وَيَسْمَأُونَ أَسِيرًا ﴿٨﴾

9. Iyagoo Dhihi waxaan idiin quudin-nay dar Eebe, mana idinka doonaynno Abaalmarin iyo Mahadnaq Midna.

إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ اللَّهِ لَا نُرِيدُ مِنكُمْ جَزَاءً وَلَا شُكْرًا ﴿٩﴾

Eebaa jiray isagoon wax kale joogin, isagaana hadhi markii la tago, waxaana dadka soomaray waqti ayna waxba ahayn, Eebaase abuuray si loo imtixaano kooda fiican iyo kan kale, jidka iyo wanaagana wuu u caddeeyay, gaaladana caddibaadbaa u sugnaatay, Mu'miniinta Eebba adeecda ee ballankiisa oofisa, Qiyaa-madana ka yaabta, masaakiinta, agoonta iyo dadka dhibbanna quudiya dar Eebe dartiis

wuxuu u darbay Janno iyo wanaag. Qataada wuxuu yidhi sharku wuu fidi maalintaas Wallaahiye intuu cirka iyo dhulka ka gaadho. Al-Insaaan (1-9).

10. Waxaan ka Yaabaynaa Eebahanno Maalin (wajigu) doorsoomi oo Daran.

إِنَّا نَخَافُ مِنْ رَبِّنَا يَوْمًا غَمُّوسًا فَحَقَّ رَبُّكَ ﴿١٠﴾

11. Eebana waa ka Dhawray sharka Maalintaas, wuxuuna siiyay nuur iyo Farax.

فَوَقَّهْمُ اللَّهُ شِرْكَ ذَلِكَ الْيَوْمِ وَلَقَّهْمُ نَصْرَةً وَسُرُورًا ﴿١١﴾

12. Wuxuuna ku abaal Mariyay Samirkooda Dartiis janno iyo Xariir.

وَجَزَّاهُمْ بِمَا صَدُرُوا لِحُبَّةٍ خَيْرًا ﴿١٢﴾

13. Waxayna ku Dangiigan Sariiro Sare, iyagoon ku arkayn qorrax iyo Dhaxan midna.

مُتَّكِنِينَ فِيهَا عَلَى الْأَرْضِ لَا يَرَوْنَ فِيهَا شَمْسًا وَلَا زَهْرًا ﴿١٣﴾

14. Waxaana u dhaw hooska jannada, waxaana loo soo Raariciyay Midheeda.

وَدَائِبُهُمْ عَلَيْهِمْ ظِلَالُهَا وَذُلَّتْ أُنُوفُهُمْ مُتَمَدِّدِينَ ﴿١٤﴾

15. Waxaa lala kor socon weelal Fidda ah iyo Koobab Quruurado ah.

وَأُطِيفُوا عَلَيْهِمْ بِآيَاتِهِ مِنْ فَضَّةٍ وَأَنْوَابٍ كَانَتْ قَوَارِيرًا ﴿١٥﴾

16. Quruuradahaas oo fidda ah si fiicanna u Qiyaasan.

قَوَارِيرًا مِنْ فِضَّةٍ قَدَّرُوهَا تَقْدِيرًا ﴿١٦﴾

17. Waxaana laga Waraabiya Ehlu jannaha Sharaab macaan oo lugu Dheehay sinjibiil.

وَيُسْقَوْنَ فِيهَا كَأْسًا كَانَتْ مِنْ أَمْحَامٍ تُخْمَلًا ﴿١٧﴾

18. Waana il lugu Magacaabo Salsabiil (ay ka cabbi).

عَيْنًا فِيهَا أُسْقَى سَلْسَبِيلًا ﴿١٨﴾

19. Waxaana u adeegi wiilal waari, Haddaad Aragtana aad u malayn Jawhar la saydhay.

﴿ وَيَطُوفُ عَلَيْهِمْ وِلْدَانٌ مُخَلَّدُونَ إِذَا رَأَيْتَهُمْ حَسِبْتَهُمْ لُؤْلُؤًا مَمْنُونًا ﴿١٩﴾

Eebe ciddii ka yaabta wuxuu ku abaal marin sharkoos ka dhawro iyo janno uu siiyo, iyagoon wax xun la kulmayn ay una shaqayn adeegayaal waari oo weelal wanaagsan ku shaqayn iyagoo loo dhammeeyay nicmooyinka Eebe aayadaha ku tilmaamay oy waajib tahay ruuxii caqli leh inuu higsado una darbado. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Adduunyada waxa lagu sheegahayo iyo jannada waxaa kulmiya magaca. Al-Insaaan (10-19).

20. Haddaad Aragto halkaas waxaad arki nicmo iyo sharaf wayn.

وَإِذَا رَأَيْتَ قَوْمًا وَكَلَّا كِبِيرًا ﴿٢٠﴾

21. Dharkooduna (Ehlu Jannaha) waa

عَلَيْهِمْ ثِيَابٌ سُنْدُسٌ خُضْرٌ وَإِسْتَبْرَقٌ وَحُلُّوْا أَسَاوِرَ مِنْ

xariir Jilicsan oo cagaaran iyo Xariir adagba, waxaana loo xidhi fidlo Gacmaha la Gashado, Eebana wuxuu ka waraabiya sharaab nadiif ah.

فِضَّةً وَسَقَمَهُمْ زُهُورًا شَرَابًا طَهُورًا ﴿١١﴾

22. Kaasi waa Abaalmarintiinii Falkiiniina wuxuu Noqday mid la Maha-diyay.

إِنَّ هَذَا كَانَ لَكُمْ جَزَاءً وَكَانَ سَعْيَكُمْ مَشْكُورًا ﴿١٢﴾

23. Annagaa Quraanka Nabiyoow kugu soo Dajinnay.

إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ الْقُرْآنَ بِتَوْرِيكِهَا ﴿١٣﴾

24. Ee ku Samir Xukunka Eebe, hana Maqlin Dambiile iyo Gaalnima Badane (warkiis).

فَأَصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ وَلَا تَطِعْ مَنَّهُمْ إِنَّمَا آوَىٰ كُفُورًا ﴿١٤﴾

25. Xus magaca Eebe subax iyo Galab-ba.

وَأَذْكُرِ أَشْرَ رَبِّكَ بَكْرَةً وَأَصِيلًا ﴿١٥﴾

26. Habeenkana Eebe u sujuud, una tasbiixso Habeenkii (u tuko) waqti Dheer.

وَمِنَ اللَّيْلِ فَاسْجُدْ لَهُ وَسَبِّحْهُ لَيْلًا طَوِيلًا ﴿١٦﴾

27. Kuwaasi waxay Jecelyihiin tan soo Dagdagaysa (Adduunyada) waxay kaga Tagayaan Gadaashoodana Maalin Culus (Qiyaamada).

إِنَّ هَذِهِ لَأَيُّ يُبَيِّنُونَ الْعَاجِلَةَ وَيَذُرُونَ وَرَاءَهُمْ يَوْمًا
ثَقِيلًا ﴿١٧﴾

28. Annagaa Abuurray Dadka, Adkay-nayna xubnohoda, Haddaan Doonna-na waxaan ku Baddalaynaa kuwa la mid ah.

نَحْنُ خَلَقْنَاهُمْ وَشَدَدْنَا أَمْرَهُمْ وَإِذَا شِئْنَا بَدَلْنَا
أُمَّتَهُمْ تُبَدِّلَا ﴿١٨﴾

29. Suuraddani waa waano, Ee Ruuxii Doona ha ka yeesho Eebe Xaggiisa waddo.

إِنَّ هَذِهِ تَذَكُّرَةٌ فَمَنْ شَاءَ اتَّخَذْ إِلَىٰ رَبِّهِ سَبِيلًا ﴿١٩﴾

30. Waxna ma dooni kartaan in Eebe doona mooyee, Eebana waa wax walba oge falsan.

وَمَا تَشَاءُونَ إِلَّا أَنْ يَشَاءَ اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ كَانَ
عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٢٠﴾

31. Wuxuu galiyaa naxariistiisa ruuxuu doono, daalimiintana wuxuu u darbay cadaab daran.

يَدْخُلُ مِنَ يَشَاءُ فِي رَحْمَتِهِ وَالظَّالِمِينَ أَعَدَّ لَهُمْ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿٢١﴾

Suurat Al-Mursalaat

سُورَةُ الْمُرْسَلَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaartay Dabaysha wanaaga lala Diro.
2. Iyo Dabaysha sida daran u dhabata.
3. Iyo Dabaysha roobka kicisa.
4. Iyo malaa'igta Xaqa iyo Baadilka kala Bixisa.
5. Iyo malaa'igta waxyiga soo Dajisa.
6. Si Dadka loo waaniyo looguna digo.
7. Ee waxa dadow Eebe ku Yaboohay wuu dhici.
8. Markase xiddiguhu Nuurku ka tago.
9. Oo samadu Dildillaacdo.
10. Oo Buuraha la Rujiyo.
11. Oo Rasuulladii la kulmiyo (iyo Dadkoodii).
12. Maalin wayn oo loo Qabtay Dar-teed.
13. In dadka la kala Bixiyo Dartiis.
14. Maalinta kala Bixinta ma Taqaanaa.
15. Halaag wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَالْمُرْسَلَاتِ عُرْفًا ①

فَالْعَصْفَاتِ عَصْفًا ②

وَالنَّشِيرَاتِ تَشِيرًا ③

فَالْفَرَقَاتِ فَرَقًا ④

فَالْمَلْفِيقَاتِ ذِكْرًا ⑤

عَذْرًا أَوْ تَذْرًا ⑥

إِنَّمَا وَعْدُونَ كَوَفِّعٌ ⑦

فَإِذَا النُّجُومُ طُمِسَتْ ⑧

وَلَمَّا السَّمَاءُ فُجِّعَتْ ⑨

وَلَمَّا الْجِبَالُ كُسِفَتْ ⑩

وَلَمَّا الرُّسُلُ أُنْفِثَتْ ⑪

لِأَيِّ يَوْمٍ أُجِّلَتْ ⑫

لِيَوْمِ الْفَصْلِ ⑬

وَمَا أَدْرَاكَ مَا يَوْمُ الْفَصْلِ ⑭

وَيَلَّ يَوْمَئِذٍ إِلَّا الْكٰذِبِينَ ⑮

Eebe wuxuu rabuu ku dhaartaa oo kamid ah Khalqigiisa, halkanna wuxuu ku dhaartay shan arrimood in waxa lugu dhaaran ay shakila'aan tahay inuu dhici, kaasoo ah abaal-marinta qiyaame, waxaana ka horrayn waxyaalo waawayn sida xiddigahoo madoobaada. Cirkoo duleeshama iyo Buurahoo burbura, maalintaasna waxaa la kulmin rasuulladii iyo ummadhoodii.

Mujaahidna wuxuu Yidhi: waa maalinta la soo kulmin Rasuullada si ay ugu marag kacaan ummadohoodii. Al-Mursalaat (1-15).

16. Miyaannaan Halaagin Ummadihii hore.

أَلَمْ نُنشَأِكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ ۖ

17. Haddana Aannaan Raacinaynin kuwii Dambe.

ثُمَّ نُنشَأُهُم بِآخِرِينَ ۗ

18. Saasaana ku Falaynaa Dambii-layaasha.

كَذَلِكَ نَفْعَلُ بِالْمُجْرِمِينَ ۗ

19. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniya.

وَيَوْمَ نَسْفَعُ الْمُكَذِّبِينَ ۗ

20. Miyaannaan Idinka Abuurin biyo tabar yar.

أَلَمْ نَخْلُقْكُمْ مِنْ مَّاءٍ مَهِينٍ ۗ

21. Markaasna yeellay meel ilaashan.

فَجَعَلْنَاهُ فِي قَرَارٍ مَكِينٍ ۗ

22. Tan iyo Muddo la yaqaanno.

إِلَى قَدَرٍ مَعْلُومٍ ۗ

23. Annagaa wax qaddarray, wax Qad-darana u Fiican.

فَقَدَرْنَا فَنِعْمَ الْقَادِرُونَ ۗ

24. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيَوْمَ نَسْفَعُ الْمُكَذِّبِينَ ۗ

25. Miyaanaan ka yeelin Dhulka ku wax duma ama weel.

أَلَمْ نَجْعَلِ الْأَرْضَ كَهَاتَا ۗ

26. Nolol iyo Geeriba.

أَحْيَاءَ وَأَمْوَاتًا ۗ

27. Waxaana yeellay Dhulka Dhexdiisa buuro sugan oo waawayn, waxaana idinka Waraabinnay biyo macaan.

وَجَعَلْنَا فِيهَا رِوْاسِيَ شَمْعِخْتٍ وَأَسْقَيْنَكُم مَّاءً فُرَاتًا ۗ

28. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيَوْمَ نَسْفَعُ الْمُكَذِّبِينَ ۗ

Eebe wuxuu inooga digay wixii ku dhacay ummadihii hore, isagoo ina xusuusin waxa laynaga abuuray iyo siduu noo abuuray, iyo siduu dhulka inoogu sahlay looguna dulnoolaan looguna dhiman, buurana ugu sugay biyo macaanna inooga waraabiyay.

Culimada Quraanka fasirtayna waxay dheheen: Eebe wuxuu ku celceliyay suuraddan (Halaag wuxuu u sugnaaday kuwa xaqa beeniyay) Toban jeer si loo badiyo doonidda iyo cabsida. Al-Mursalaat (16-28).

29. Aada gaalooy cadaabkii xaggiisa aad Beenin Jirteen.

أَطْلِقُوا إِلَى مَا كُنتُمْ بِهِ تُكَذِّبُونَ ۗ

30. Aada hoos (Qiiqa naarta) oo saddex madax ah.

أَطْلِقُوا إِلَىٰ ظِلِّي ذِي ثَلَاثِ شُعَبٍ ﴿٣٠﴾

31. Oon hoosinayn, ololla (Kulaylna) wax ka tarayn.

لَا ظَلِيلٍ وَلَا يُعْنِي مِنَ اللَّهَبِ ﴿٣١﴾

32. Waxayna Naartu tuuri Dhimbilo daran ood Mooddo daar.

إِنَّمَا تُرَىٰ بِسَرَرٍ كَالْقَصْرِ ﴿٣٢﴾

33. Ama aad Mooddo geel madaw ah.

كَأَنَّهُ جِعَلَتْ صُفْرًا ﴿٣٣﴾

34. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيَلُّ يَوْمَئِذٍ لِلْمُكَذِّبِينَ ﴿٣٤﴾

35. Taasina waa maalin aynan hadlaynin Dadku.

هَذَا يَوْمٌ لَا يَنْطَفِقُونَ ﴿٣٥﴾

36. Lamana idmo si Ay u cudurdaartaan.

وَلَا يُؤْذَنُ لَهُمْ فَيَعْتَدُونَ ﴿٣٦﴾

37. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيَلُّ يَوْمَئِذٍ لِلْمُكَذِّبِينَ ﴿٣٧﴾

38. Maalintan waa maalintii kala Bixinta, Waana idin kulminnay idinka iyo kuwii Horreeyayba.

هَذَا يَوْمٌ الْفَصْلِ طَجَعْتُمْ كَرْمًا وَالْأَوْلَادِ ﴿٣٨﴾

39. Ee Haddaad wax Dhagrikartaan i Dhagra.

إِن كَانَ لَكُمْ كَيْدٌ فَكِيدُوا ﴿٣٩﴾

40. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيَلُّ يَوْمَئِذٍ لِلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٠﴾

Eebe cidna ma dulmiyo Qiyaamana waxaa lagu abaalmarin xaq-diidayaasha caddibaad daran, iyadoon cidna hadli karin ruux Eebe idma mooyeen, iyadoo dadkoo dhan la kulmin.

Dabarina wuxuu yidhi: hooska naartu kulaylkeedana kama hadheeyo, lololkeedana kama dugsiiyo. Al-Mursalaat (29. 40).

41. Kuwa Eebe ka Dhawrsada waxay ku sugnaan hoos iyo ilo.

إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي ظِلِّ وَعُيُونِ ﴿٤١﴾

42. (Waxayna Cuni) khudaartay Doo-naan.

وَوَكْرَةً وَمِمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaana Lagu dhihi Cuna oo cabba Idinkoo shifaysan Camalkiinnii Dartiis.

كُلُوا وَأَشْرَبُوا وَهُنَّئِي بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

44. Sasaana ku abaalMarinaynaa ku wa wanaagga fala.

إِنَّا كُنَّا لَكَ نَجْرِي الْمُحْسِنِينَ ﴿٤٤﴾

45. Halaagna wuxuu u Sugnaaday kuwa xaqa Beeniya.

وَيَلِّمُ يَوْمَئِذٍ الْمَكْذِبِينَ ﴿٤٥﴾

46. (Gaalada waxaa lagu Dhihi) Cuna oo Raaxaysta wax yar, waxaad tihiin Dambiilayaale.

كُلُوا وَشَبِّهُوا قِيلًا إِنَّكُمْ تَجْحَرُونَ ﴿٤٦﴾

47. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيَلِّمُ يَوْمَئِذٍ الْمَكْذِبِينَ ﴿٤٧﴾

48. Markii la yidhaahddo Gaalada tukada ma tukadaan.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ أَرَأَيْتُمْ إِنْ كُنْتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿٤٨﴾

49. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيَلِّمُ يَوْمَئِذٍ الْمَكْذِبِينَ ﴿٤٩﴾

50. Hadalkeebay Quraanka Dabadiis Rumaynayaan.

فِي أَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَهُ يُؤْمِنُونَ ﴿٥٠﴾

Ruux walba wuxuu la kulmi wuxuu hormarsaday, wuxuuna goosan midhuhu abuurtay, Mu'miniintuna waxay ku sugnaan Maalintaas Qiyaame hoos, iyo biyo dureeri, iyo nicmo badan, siday gaaladuba ugu sugantahay Naar daran iyo oon iyo kadeedba, maxaa yeeley wanaagoodii adduunyadii bay ku soo hormarsadeen, waxaase la yaable oo isawaydiis leh ruuxii Quraankan rumaynwaaya waxa kalees rumayn. Muqaatil wuxuu sheegay: inay ku soo dagtay aayadda (Haddii loo yidhaahdo tukada ma tukadaan) Reet Thaqiif, oo Nabiga ka codsaday in salaadda laga daayo, Nabiguna uu diiday naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee oo uu yidhi: Khayr ma leh diin aan salaad lahayn, taasina waxay ku tusin Salaadda iyo Islaamnimadu inay isku xidhanyihiin. Al-Mursalaat (41-50).



Suurat An-Naba'



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Maxay iska waydiinayaan (Gaaladu). عَمَّ يَتَسَاءَلُونَ ﴿١﴾
2. Warkii waynaa xaggiisa (Qiyaamada ama Quraanka). عَنِ النَّبِيِّ الْعَظِيمِ ﴿٢﴾
3. Ay isku diiddanaayeen. الَّذِي هُمْ فِيهِ مُخْتَلِفُونَ ﴿٣﴾
4. Saas ma aha ee way ogaan doonan. كَلَّا سَيَعْمُونَ ﴿٤﴾
5. Haddana way ogaandoonaan (waxa ku dhaca). وَكَلَّا سَيَعْمُونَ ﴿٥﴾
6. Miyaannaan Dhulka gogol ka yeelin. أَلَمْ تَجْعَلِ الْأَرْضَ مَهْدًا ﴿٦﴾
7. Buurahana Rukummo (ka yeelin). وَالْجِبَالَ أَوْتَادًا ﴿٧﴾
8. Miyannaan idinka Abuurina Noocyo. وَخَلَقْنَاكُمْ أَزْوَاجًا ﴿٨﴾
9. Miyaannaan Hurdada Raaxo idiinka dhigin. وَجَعَلْنَا نَوْمَكُمْ سُبَاتًا ﴿٩﴾
10. Miyaannaan Habeenka asturaad idiinka dhigin. وَجَعَلْنَا اللَّيْلَ لِبَاسًا ﴿١٠﴾
11. Miyaannaan Maalinta waqti shaqo idiinka dhigin. وَجَعَلْنَا النَّهَارَ مَعَاشًا ﴿١١﴾
12. Korkiinna miyaannaan ka dhisin Toddoba xoog leh. وَبَنَيْنَا فَوْقَكُمْ سَبْعًا سِدَادًا ﴿١٢﴾
13. Miyaannaan dhexdeeda yeelin Siiraad aad u ifi (Qorraxda). وَجَعَلْنَا سِرَاجًا وَهَاجًا ﴿١٣﴾

Aayadahani waxay caddayn canaanta ku dhici kuwa Quraanka, Qiyaamada iyo Xaqa ka shakiya, Eebana wuu u goodiyay, maxaa yeelay Nicmooyinkiisa yay u jeedaan, sida Dhulka, Buuraha, Abuurka, Hurdada raaxada ah, Habeenka, Maalinta'Cirka iyo Ifiinka Eebe inoo yeelay, Eebaha ahaysiiyay Waxyaalahaas iyo Nicmooyin kale oo badanba ma mudna in laga Gaaloobo, ee wuxuu mudanyahay rumayn iyo addeecid. An-Naba' (1-13).

14. Waxaan idiinka soodajinnay daruuraha biyo badan.

وَأَنْزَلْنَا مِنَ الْمُعْصِرَاتِ مَاءً مَّجْجَابًا ﴿١٤﴾

15. Si aan ugu soo bixinno Midho iyo Daaq.

لِنُخْرِجَ بِهِ حَبًّا وَنَبَاتًا ﴿١٥﴾

16. Iyo Beero kulansan (badan).

وَجَعَلْنَا الْفَأَاقِمَ ﴿١٦﴾

17. Maalinta kalabuxu waxay leedahay waqti go'an.

إِنَّ يَوْمَ الْفَصْلِ كَانَ مِيقَتَنَا ﴿١٧﴾

18. Waana Maalinta Suurka la afuufi ood u imanaysaan Kooxo.

يَوْمَ يُنْفَخُ فِي الصُّورِ فَتَأْتُونَ أَقْوَامًا ﴿١٨﴾

19. Samadana waa la furi waxayna yeelan Albaabo.

وَفُتِحَتِ السَّمَاءُ فَكَانَتْ أَبْوَابًا ﴿١٩﴾

20. Buurahana waa la kaxayn waxayna noqon Dhalanteed.

وَسُيِّرَتِ الْجِبَالُ فَكَانَتْ سَرَابًا ﴿٢٠﴾

21. Naarta Jahannamana waxay u darbantahay.

إِنَّ جَهَنَّمَ كَانَتْ مِرْصَادًا ﴿٢١﴾

22. (Gaalada) Xadgudbay meelay u noqdaan.

لِلظَّالِمِينَ مَعَابًا ﴿٢٢﴾

23. Waxayna ku nagaan Dhexdeeda Sanooyin.

لَيْتِينَ فِيهَا أَحْقَابًا ﴿٢٣﴾

24. Mana ku dhadhamiyaan dhexdeeda qabaw (ama Hurdo) ama cabbid midna.

لَا يَدُورُونَ فِيهَا بَرْدًا وَلَا شَرَابًا ﴿٢٤﴾

25. Waxaan ahayn biyo kulul iyo Dhacaanka (ehlu Naarka).

إِلَّا الْحَمِيمَ وَعَسَاقًا ﴿٢٥﴾

26. Waxaana lagu abaalmaryay si waafaqsan Camalkoodii.

جَزَاءً وَفَاقًا ﴿٢٦﴾

27. Waxayna ahaayeen kuwa aan ka yaabaynin xisaab.

إِنَّهُمْ كَانُوا إِلَّا يَرْحُونَ حِسَابًا ﴿٢٧﴾

Deeqda Eebe waxay mudantahay in lugu mahadiyo, maxaa yeelay waxaa dambeeya Qiyaame, Xisaab, Abaalmarin iyo Ciqaab kuwa xadgudba een Eebe ka yaabin, waxayna ku waari Naar daran oon wax wanaaagsan oo la cabbo iyo Hurdo iyo Raaxo midna lahayn, Eebana cidna ma dulmiyo, ee iyagaa is dulmiyay.

Qataada wuxuu yidhi: (Nagaanshaha Sanooyinka) waa waxaan dhammaanaynin, markuu mid tagaba midbaa iman. An. Naba' (14-27).

28. Waxayna beeniyeen Aayaadkanna-ga.

وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا كِذَابًا ﴿٢٨﴾

29. Wax walbana waxaan ku koobnay Kitaab.

وَكُلُّ شَيْءٍ أَحْصَيْنَاهُ كِتَابًا ﴿٢٩﴾

30. Ee dhadhamiya Caddibaad Gaalooy waxaan caddibaad ahyn idiin kordhinmaynee.

فَذُوقُوا فَلَنْ نَزِيدَكُمْ إِلَّا عَذَابًا ﴿٣٠﴾

31. Kuwa Eebe ka dhawrsada waxay leeyihiin liibaan.

إِنَّ الْمَتَّقِينَ لَمَقَارِبًا ﴿٣١﴾

32. Beero iyo Cinabyana way heli.

حَدَائِقَ وَأَعْنَابًا ﴿٣٢﴾

33. Waxayna Guursan Haween da'yar oo isle eg.

وَكَوَاعِبَ أُنثَىٰ كَرِيمًا ﴿٣٣﴾

34. Waxayna heli Cabbid wanaagsan.

وَكَأْسًا دِهَاقًا ﴿٣٤﴾

35. Jannada kuma dhexmaqlaan hadal macna la'aan ah iyo is beenin midna.

لَا يَسْمَعُونَ فِيهَا لِقَاءَ أَوْ كَذِبًا ﴿٣٥﴾

36. Waa abaalmarin Eebe uu siiyay oo ku filan.

جَزَاءً مِّن رَّبِّكَ عَطَاءً حِسَابًا ﴿٣٦﴾

37. Eebaha Samada iyo Dhulka iyo waxa u dhexeeya waa Allaha Raxmaan ah, Hadal wax ku soocelinna ma jiro (Qiyaamada).

رَبِّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا الرَّحْمَنِ لَا يَمْلِكُونَ مِنْهُ خِطَابًا ﴿٣٧﴾

38. Maalinta Jibriil iyo Malaa'igtu Saf istaagi wax hadli ma jiro Ruux Eebe idmo mooyee oo Hadal xaq ah ku hadla.

يَوْمَ يَقُومُ الرُّوحُ وَالْمَلَائِكَةُ صَفًّا لَا يَتَكَلَّمُونَ إِلَّا مَنْ أَذِنَ لَهُ الرَّحْمَنُ وَقَالَ صَوَابًا ﴿٣٨﴾

39. Maalintaasi waa sugantahay ee Ruuxii doona Eebe xaggiisa meeluu ku noqdo ha ka samaysto.

ذَٰلِكَ الْيَوْمُ الْحَقُّ فَمَنْ شَاءَ اتَّخَذْ إِلَىٰ رَبِّهِ مَعَابًا ﴿٣٩﴾

40. Waxaannu idiinka digaynaa Caddibaad dhaw Maalinta uu arki Ruux walba waxay Gacmihiisu hor marsadeen, Gaalkuna uu dhihi Shallaytaday-dee maan Carro noqdo.

إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ وَإِنَّا كُنَّا نُنزِلُهُ قُرْآنًا مَّعْرُوفًا وَتِلْكَ الْأَيَاتُ تُنَزَّلُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ فِيهَا يُفْرَقُ الْوَعْدُ مِنَ الْحَقِّ وَمَا يُوعَدُونَ إِلَّا بِالْحَقِّ وَإِنَّا كُنَّا نُنزِلُهُ قُرْآنًا مَّعْرُوفًا ﴿٤٠﴾

Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa'igta siddu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in Qiyaamadu tahay wax sagan ruuxii rumecyana ee xaqa raaca uu ugu abaal-mariyo Janno iyo wanaag. Maalinta Qiyaame iyo dhibaataadeedana waa in Ruuxii Caqli leh u darbadaa, illeen waa Maalin xaq ah, ruux walbana wuu arki wuxuu hor marsaday, calaalcalna usaan wax taraynin ee camal wax taro. An-Naba' (28-40).

Suurat An-Naazicaat

سُورَةُ النَّازِعَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa'igta Nafta si daran uga siiibta (gaalada).

وَالنَّازِعَاتِ غَرْاقًا ①

2. Iyo tan si fudud uga qaadda (mu'miiniinta).

وَالنَّاطِلَاتِ نَشْطًا ②

3. Iyo Malaa'igta Hawada Dabbaalata (si amar fulin).

وَالسَّادِحَاتِ سَيْحًا ③

4. Iyo tan u orotanta wanaagga.

فَالسَّاقِيَاتِ سَيْحًا ④

5. Iyo kuwa Maamula amarka (Eebe).

فَالْمُدَبِّرَاتِ أَمْرًا ⑤

6. Maalinta ay gilgilan afuufka (hore).

يَوْمَ تَرْجُفُ الرَّجُلَةَ ⑥

7. Oyna raaci tii dambe (waa sugantahay).

تَتَّبِعُهُ الرَّاوِدَةُ ⑦

8. Qalbiyaduna Maalintaa way cabsan.

قُلُوبٌ يَوْمَئِذٍ رَاجِعَةٌ ⑧

9. Araggeeduna wuu dullaysnaan.

أَبْصُرُهَا خَيْصَعَةٌ ⑨

10. Waxayna dhihi (Gaaladu) Ma raadkiibaa naloo celin (Adduunkii).

يَقُولُونَ أَهْ نَا الْمَرْدُونَ فِي الْخَافِرَةِ ⑩

11. Markaan noqonno Lafo duugoo-bay.

أَلَيْدَاكَأَعْظَمَ الْجُرْحِ ⑪

12. Waxay dheheen taasi waa noqosho khasaara ah.

قَالُوا تَبَّكَ إِذَا ذُكِرَ خَالِسَةً ⑫

13. Waa uun Hal Qaylo kaliya.

فَلِنَمَاهِي رِجْرَةً وَحِيدَةً ⑬

14. Dadkuna markaas ay Dhulka kor iman.

فَإِذَا هُمْ بِالسَّاهِرَةِ ⑭

Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa'igta siduu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in Qiyaamadu wax sugan tahay dhibaataana leedahay Eebe Cid uu ka koriyo mooyee, Dadkana waa la soo kulmin si loo abaalmariyo, Eebaha abuuriddoodii karayna kama daalo inuu soo bixiyo wayna u fuddahay.

Tirmidi wuxuu wariyay: in Rasuulkii Eebe Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa ha yeelee markuu tago Habeenka Daloolkiis wuu istaagi jiray, wuxuuna dhihi jiray: «Dadoow xusa Eebe Afuufiddii hore timid tii dambena way raaci, Geerina timid iyo wixii ku dhex sugan». An-Naazicaat (1-14).

15. Ma ku soo gaadhay warkii (Nabi) Muuse. هَلْ أَتَاكَ حَدِيثٌ مُوسَى ﴿١٥﴾
16. Markii Eebe uga yeedhay Toggii barakaysnaa ee Duwa. إِذْ نَادَاهُ رَبُّهُ بِاللَّوْلِ الْمَقْدَسِ طُوًى ﴿١٦﴾
17. Kuna yidhi u tag Fircoon wuu xadgudbaye. أَذْهَبَ إِلَى فِرْعَوْنَ إِنَّهُ طَغَى ﴿١٧﴾
18. Oo ku dheh ma rabtaa inaad daahir noqotid. فَقُلْ هَلْ لَكَ إِلَهٌ إِلَّا أَنَا تَرَكَّى ﴿١٨﴾
19. Oon Eebe Jidkiisa kugu hanuuniyo kana yaabtid. وَأَهْدِيكَ إِلَى رَبِّكَ فَتَحْتَمَى ﴿١٩﴾
20. Wuxuuna tusiyay (Nabi-Muuse) Aayad wayn. فَآرَاهُ الْآيَةَ الْكُبْرَى ﴿٢٠﴾
21. Wuuse beeniyay oo caasiyay (Fircoon). فَكَذَّبَ وَعَصَى ﴿٢١﴾
22. Wuuna jeedsaday isagoo xumaan la socda. ثُمَّ أَدْبَرَ سَعَى ﴿٢٢﴾
23. Wuxuuna kulmiyay (Askartii) una Qaylyay. فَشَرَّ فَنَادَى ﴿٢٣﴾
24. Isagoo dhihi waxaan ahay Eebihiiin-na sare. فَقَالَ أَنَا رَبُّكُمُ الْأَعْلَى ﴿٢٤﴾
25. Markaasaa Eebe Ciqaabay Aakhiro iyo Adduunba. فَأَخَذَهُ اللَّهُ نَكَالَ الْأَخْرُورِ وَأَلْوَى ﴿٢٥﴾
26. Arrintaasna waano yaa ugu sugan Ruuxii Eebe ka yaabi. إِنَّ فِي ذَلِكَ لَعِبْرَةً لِمَن يَخْشَى ﴿٢٦﴾

Nabi Muuse wuxuu Eebe faray inuu Dadkii Masar dagganaa Xaqa ugu yeedho hase yeeshee Fircoon oo xukunka haystay yaa ka hor joogsaday, uguna yeedhay inay isaga addeecaan, mar hadduu awoodda sare isagu leeyahay, ugu dambayntiise Fircoon iyo colkiisiiba waa la hallaagay waxaana dhulkii u hadhay Nabi-Muuse iyo intii la jirtay ee xaqa rumaysay, taasina waxay ku tusin in xumaantu tagi xaquna hadhi. An-Naazicaat (15-26).

27. Ma idinkaa daran abuuridda mase Samada Eebaa dhisay. وَأَنشَأْتُمْ شُجْرًا قَلْبًا أَمْ أَلْسِنًا بَدَهَا ﴿٢٧﴾
28. Korna yeelay jurmigeeda ekeeyay-na. رَفَعَ سَمْعَهَا فَسَوَّاهَا ﴿٢٨﴾
29. Habeenkeedana madoobeeyay Maa-linteedana soo bixiyay (Ifiyay). وَأَعْطَسَ لَيْلَهَا وَأَخْرَجَ صُحُفَهَا ﴿٢٩﴾

30. Dhulkana markaas ka dib fidiyay. وَالْأَرْضَ بَعْدَ ذَلِكَ دَحَاهَا ﴿٣٠﴾
31. Biyaahiisa iyo Daaqiisana soo bi-xiyay. أَخْرَجَ مِنْهَا مَاءَهَا وَمَرْعَاهَا ﴿٣١﴾
32. Buurahana sugay. وَالْجِبَالَ أَرْسَاهَا ﴿٣٢﴾
33. Si aad idinka iyo Xoolihiinnu ugu nacfidaan. مَتَّعَالِكُمْ وَلَا تَعْكُمْ ﴿٣٣﴾
34. Markay timaaddo Musiibadii way-nayd (qiyaamadu). فَإِذَا جَاءَ تِلْكَ الْأَمْثَلُ لَكُرْبَىٰ ﴿٣٤﴾
35. Maalintaas Dadku way xusuusan waxay faleen. يَوْمَ يَتَذَكَّرُ الْأُنسَ مِمَّا سَعَىٰ ﴿٣٥﴾
36. Naarta Jaxiimana waxaa loo muujin Ruuxii Arki. وَوَرِثَتِ الْجَحِيمُ لِمَنْ بَرَىٰ ﴿٣٦﴾
37. Ruuxiise xadgudba. فَأَمَّا مَنْ طَغَىٰ ﴿٣٧﴾
38. Nolosha Adduunyana doorta. وَاتَّخَذَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا ﴿٣٨﴾
39. Wuxuu ku dheelman Naarta Jaxii-mo. فَإِنَّ الْجَحِيمَ هِيَ الْمَأْوَىٰ ﴿٣٩﴾
40. Ruuxiise ka yaaba la kulanka Eebe Naftana ka reeba Hawada (xun). وَأَمَّا مَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِ وَنَهَى النَّفْسَ عَنِ الْهَوَىٰ ﴿٤٠﴾
41. Wuxuu u dheelman Janno. فَإِنَّ الْجَنَّةَ هِيَ الْمَأْوَىٰ ﴿٤١﴾
42. Waxay ku waydiin Saacadda (Qiyaamaha) markay sugnaan. يَسْتَعْلُونَكَ عَنِ السَّاعَةِ أَيَّانَ مُرْسَاهَا ﴿٤٢﴾
43. Maxaa ku ogaysiyay waqtigeeda. فِيمَ أَنْتَ مِنْ ذِكْرِهَا ﴿٤٣﴾
44. Eebe umbuu ku dhammaan ogaans-heheedu. إِلَىٰ رَبِّكَ مُتَهَلِّئًا ﴿٤٤﴾
45. Adugu waxaad tahay uun u digaha Ruuxii ka yaabi. إِنَّمَا أَنْتَ مُذَكَّرٌ مِنْ يَخْشَاهَا ﴿٤٥﴾
46. Waxay la mid noqon Maalintay arkaan (Qiyaamada) iyagon nagaanin Galab iyo Barqin mooyeen (Adduun-ka). كَأَنَّهُمْ يَوْمَ يَرَوْنَهَا لَوَيْبِسُوا إِلَّا عَشِيَّةً أَوْ ضُحَاهَا ﴿٤٦﴾

Isagoo Eebe u nicmeeyay yaa haddana Dadku xaqa beenin iyo Qiyaamadaba, markase dhabtu timaaddo Eebana la hor yimaaddo waxaa la kala aadi Laba Waddo, Jaxiima iyo Janno, Qiyaamadu markay dhicina Eebaa ku cilmi leh, mase aha wax la dadajisto, waxaase wax tari in wanaag la hormarsado, raaxa Adduun iyo ku raagiddiisuba waa wax yar. Qataada wuxuu yidhi: Addunyadu way la yaraan Dadka markay Aakharo arkaan. An-Naazicaat (27-46).

Suurat Cabasa



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Wajiguu u uruuriyay oo jeedsaday (Nabigu).

عَبَسَ وَتَوَلَّى ۝١

2. Inuu u yimid kii Indhaha la'aa.

أَن جَاءَهُ الْأَعْمَى ۝٢

3. Miyaad ogtahay inay u dhawdahay inuu hanuuno oo Daahir noqdo.

وَمَا يَذْكُرُ لَكُمْ لَعَلَّهٗ يَرْزُقُ ۝٣

4. Ama uu xusuusto oy xusuustu anfaco.

أَوَيْدُكَ فَتَنْفَعُهُ الذِّكْرُ ۝٤

5. Ruuxiise is deeqtoonaysiiya (islana waynaada).

أَمَّا مَن أَسْتَفْعَى ۝٥

6. Ma adaa u bambixi.

فَأَن تَلَهُ، وَصَدَى ۝٦

7. Maxaa kaa saaran hadduusan hanuunin.

وَمَا عَلَيْكَ الْإِبْرَئِيلُ ۝٧

8. Ruuxiise kuu yimaadda isagoo dagdagi.

وَأَمَّا مَن جَاءَهُ كَيْسَعَى ۝٨

9. Oo Eeba ka yaabi.

وَهُوَ تَحْشَى ۝٩

10. Miyaad ka shuqloomi.

فَأَن تَعْنَهُ تَأْتَى ۝١٠

11. Saas ma aha ee Aayadahani waa waano.

كَلَّا إِنَّمَا تَذَكَّرُ ۝١١

12. Ruuxii doonana wuu ku waana qaadan.

فَمَن شَاءَ ذَكَّرْهُ ۝١٢

Suuraddani waxay ku soo dagtay mar Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) uu ku shuqloonaa qaar ka mid ah Gaaladii Qureesheed ee Makaad si uu ugu sharxo Diinta Islaamka ah markaasaa waxaa u yimid Nin Indha la'aa la dhihi jirayna Cabdullaahi Ibnu Ummi Maktuum, wuxuuna ku celceliyay Nabiga Hadalka, Hase yeeshee Nabigu wuxuu wali ku shuqloonaa hanuuninta Gaaladaas, Markaasaa Eebe Suuraddan soo dajiyay, Nabiguna had iyo jeer wuxuu soo dhaweenjiray Saxaabigaa la soo sheegay isagoo dhihi jiray: Soo dhawow Kii Eebe Igu dagaalayow, taasina waxay ku tusin Caddaaladda iyo sinnaanta islaamka, Eebana cidduu doono wuu hanuunin. Cabasa (1-12).

13. Waxay ku sugantahay (waanadu) Kutub Sharaf leh. ﴿١٣﴾ فِي صُحُفٍ مُّكْرَمَةٍ
14. Oo la kor yeelay lana Daahiriyay. ﴿١٤﴾ مَرْفُوعَةٍ مُّطَهَّرَةٍ
15. Oy Gacanta ku hayaan Malaa'ig (wax qorta). ﴿١٥﴾ بِأَيْدِي سَفَرَةٍ
16. Sharafna leh oo baarri ah. ﴿١٦﴾ كِرَامٍ بَرَرَةٍ
17. Gaalo halla lacnado Gaalnima badanaa. ﴿١٧﴾ قِيلَ الْإِنْسَانُ مَا أَكْفَرَهُ
18. Muxuu Eebe ka abuuray kuwaas. ﴿١٨﴾ مِنْ أَنَّى شِئَ وَخَلَقَهُ
19. Dhibicbuu ka abuuray wuuna ekeeyay. ﴿١٩﴾ مِنْ نُّطْقِهِ خَلَقَهُ، فَقَدَرَهُ
20. Jidkana wuu u fudaydiyay. ﴿٢٠﴾ ثُمَّ السَّبِيلَ يَسَّرَهُ
21. Markaasuu dilaa Qabrina ku Asturraa. ﴿٢١﴾ ثُمَّ أَمَانَهُ، فَأَقْرَرَهُ
22. Markuu doonana wuu soo bixin. ﴿٢٢﴾ ثُمَّ إِذَا شَاءَ أَنشَرَهُ
23. Saas ma aha (ee Dadku) wixii la faray ma yeelin. ﴿٢٣﴾ كَلَّا لَمَّا يُقِضْ مَا أَمَرَهُ

Kutubta Eebe iyo Waxyigiisaba waxaa maamula Malaa'ig sharaf leh oo daahir ah, Gaalase ma oggolaato xaqa Kibir iyo isla wayni dartiis, iyagoo garan waxa Eebe Dadka ka abuuray iyo siddu u ugu sama falay, Dadse ma falin wixii Eebe faray. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Jidkaa loo sahlay waa ka soo bixiddi uurka Hooyo, Cikrimana saasuu Qabaa iyo Ibnu-Jariir.

Labada Jid yaa loo kala caddeeyayna waa la dhahaa.

Mujaahidna wuxuu yidhi: Ruuxna ma wada falo wixii Eeba wada faray. Cabasa (13-23).

24. Dadku ha fiiriyo Cuntadiisa. ﴿٢٤﴾ فَلْيَنْظُرِ الْإِنْسَانُ إِلَى طَعَامِهِ
25. Inaan Roob ku soo shubno. ﴿٢٥﴾ أَنَّا صَبَبْنَا الْمَاءَ صَبًّا
26. Dhulkana markaas aan jeexno. ﴿٢٦﴾ ثُمَّ شَقَقْنَا الْأَرْضَ شَقًّا
27. Kana soo bixinno Midho. ﴿٢٧﴾ فَأَنْبَتْنَا فِيهَا حَبًّا
28. Iyo cinab iyo Daaqa (Xoolaha). ﴿٢٨﴾ وَعَبًّا وَقَضْبًا
29. Iyo Zaytuun iyo Timir. ﴿٢٩﴾ وَزَيْتُونًا وَنَخْلًا
30. Iyo Beero waawayn. ﴿٣٠﴾ وَحَدَائِقَ غُلَبًا
31. Iyo Faakiho (khudaar) iyo Daaq. ﴿٣١﴾ وَفَاكِهَةً وَأَبًّا
32. Si aad ugu intifaacdaan idinka iyo xoolihiinnu. ﴿٣٢﴾ مَتَّعْنَاكُمْ وَلَئِن كُنْتُمْ

33. Markay Qayladii darrayd timaaddo (Suurka).

فَإِذَا جَاءَتْ الصَّاحَّةُ ﴿٣٣﴾

34. Waa maalinta Ruuxu ka carari Wallalkiis.

يَوْمَ يَقْرَأُ الْمُرءُ مِنْ أَخِيهِ ﴿٣٤﴾

35. Iyo Hooyadiis Iyo Aabihiis.

وَأُمِّهِ وَأَبِيهِ ﴿٣٥﴾

36. Iyo Haweeneydiisii iyo Carruurtiisii.

وَصَلْبِجَتِهِ وَوَبْنِيهِ ﴿٣٦﴾

37. Ruux walbana Maalintaas waxaa shuqlin xaalkiisa.

لِكُلِّ أَمْرٍ مِنْهُمْ يَوْمَئِذٍ شَأْنٌ يُغْنِيهِ ﴿٣٧﴾

38. Wajiyaal Maalintaas way Nuuri (Farxi).

وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ مُّسْفِرَةٌ ﴿٣٨﴾

39. Wayna Qosli oy bishaaraysan.

صَّاحِكَةٌ مُّسْتَبْشِرَةٌ ﴿٣٩﴾

40. Wajiyaalna Maalintaas waxaa ka muuqan Dulli.

وَوُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ عَلَيْهَا غَبَرَةٌ ﴿٤٠﴾

41. Waxaana dabooli Madow (iyo naxdin).

تَرَهَّقَهَا قَبْرَةٌ ﴿٤١﴾

42. Kuwaasina waa Gaalada Faasiqiinta ah (aadna u xun).

أُولَئِكَ هُمُ الْكَفَرَةُ الْفَجَرَةُ ﴿٤٢﴾

Eebe wuu u nicmeeyay Dadka, Cirka iyo Dhulkana khayraad-buu uga soo saaray si ay ugu nacfiyaan uguna mahadiyaan maxaa yeeday waxaa iman Maalin daran oo Ruuxba Ruux ka carai dhibaato darteed kolay tahay Qaraabadii, Dadku Labuu noqon, mid farxoo bishaaraysta camalkiisii fiicnaa dartiis, iyo mid dullaysan oo naxsan waana Gaalada xad-gudubtay.

Sawda Haweenaydii Nabiga ahayd waxaa laga wariyay inay tidhi: Rasuulkii Eebe wuxuu yidhi Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Dadka waxaa la soo bixin iyagoo Kaba la; oo qaawan oon Gudnayn Dhididkuna xakameeyay gaadhayna dhagaha» markaasaan idhi: Alla Cawradaay qaar qaar ma dayi? markaasuu yidhi: Dadka waa la shuqliyay (Ruux walba Xaalkiisaa ku fillaan). Cabasa (24-42).

Suurat At-Takwiir

سُورَةُ التَّكْوِيْنِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Marka qorraxda la duubo (Qiyaa-mada).

إِذَا السَّمْسُ كُوِّرَتْ ﴿١﴾

2. Xiddiguhuna daataan (iyagoo Madow).

وَإِذَا النُّجُومُ انْكَدَرَتْ ﴿٢﴾

3. Buurahana la kexeeyo (La rujiyo).

وَإِذَا الْجِبَالُ سُيِّرَتْ ﴿٣﴾

4. Geelii rimmanaana la halleeyo.

وَإِذَا الْعِشَارُ عُطِّلَتْ ﴿٤﴾

5. Dugaaggana la kulmiyo (Qisaas darteed).

وَإِذَا الْوُحُوشُ حُضِرَتْ ﴿٥﴾

6. Badahana la kululeeyo.

وَإِذَا الْبِحَارُ سُجِّرَتْ ﴿٦﴾

7. Naf walbana Jidhkeedii lagu lammaaneeyo.

وَإِذَا النُّفُوسُ زُوِّجَتْ ﴿٧﴾

8. Gabdhihii la xabaalnololiyayna la warsado.

وَإِذَا الْمَوْءُودَةُ سُئِلَتْ ﴿٨﴾

9. Maxaa dambi ah oo loo dilay.

بِأَيِّ ذَنْبٍ قُتِلَتْ ﴿٩﴾

10. Kutubta (camalkana) la fidiyo.

وَإِذَا الصُّحُفُ نُتِرَتْ ﴿١٠﴾

11. Samadana la rujiyo.

وَإِذَا السَّمَاءُ كُشِطَتْ ﴿١١﴾

12. Naarta Jaxiimana la huriyo.

وَإِذَا الْجَحِيمُ سُعِّرَتْ ﴿١٢﴾

13. Jannadana la dhaweeyo.

وَإِذَا الْجَنَّةُ أُزْلِفَتْ ﴿١٣﴾

14. Waxay ogaan nafu waxay camal fashay.

عَلِمَتْ نَفْسٌ مَّا أَحْضَرَتْ ﴿١٤﴾

Eebe isagaa wax walba abuuray, wuxuu doonana wuu falaa, Qiyaamadu markay imaanna wuxuu muujin calaamooyiin iyadoo Ruux walba Eebe tusin wuxuu Adduunka ku camal-falay, kana abaalmarin Khayr iyo sharba.

Abuu hurayra wuxuu ka wariyay Nabiga «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee»: Qorraxda iyo Dayaxa waa la duubi Maalinta Qiyaame. At-Takwiir (1-14).

15. Waxaan ku dhaartay «buu Eebe yidhi» Xiddigaha Qarsooma (Maalintii).

فَلَا أُقِيمُ بِالْحَاسِسِ ﴿١٥﴾

16. Ee socda iftiinka Qorraxdana ku qarsooma.

أَجْوَارِ الْكَائِسِ ﴿١٦﴾

17. Iyo Habeenku markuu jeedsado.

وَاللَّيْلِ إِذَا عَسَوَسَ ﴿١٧﴾

18. Iyo subaxu markuu soo qaabilo.

وَالصُّبْحِ إِذَا تَنَفَّسَ ﴿١٨﴾

19. Ee Quraanku waa hadalka Eebe, Soona raray Malag sharaf lah.

إِنَّهُ لَقَوْلُ رَسُولٍ كَرِيمٍ ﴿١٩﴾

20. Xoogna leh Eeba agtiisana Daraja ku leh.

ذِي قُوَّةٍ عِنْدَ ذِي الْعَرْشِ مَكِينٍ ﴿٢٠﴾

21. Laguna addeeco halkaas aaminna ah.

مُطَاعٍ ثَمَّ أَمِينٍ ﴿٢١﴾

22. Saaxiibkiinna (Nabiguna) ma aha ku waalan.

وَمَا صَاحِبُكُمْ يَحْسَبُونَ ﴿٢٢﴾

23. Horaybuuna ugu arkay Jibriil Jahadii Caddayd (Bariga Maka).

وَلَقَدْ رَآهُ بِالْأُفُقِ الْمِينِ ﴿٢٣﴾

24. Nabiguna ma aha Ruux lugu shakiyo waxa Maqan.

وَمَا هُوَ عَلَى الْغَيْبِ بِضَنِينٍ ﴿٢٤﴾

25. Quraankuna ma aha hadal shaydaan la fogeeyay.

وَمَا هُوَ يَقُولُ سَيُطَنِّ رَجِيمٍ ﴿٢٥﴾

26. Ee xageed Gaalooy aadaysaan.

فَأَيْنَ تَذْهَبُونَ ﴿٢٦﴾

27. Quraankuna waxaan waanada caalamka ahayn ma aha (waa waano).

إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ لِلْعَالَمِينَ ﴿٢٧﴾

28. Ruuxii doona inuu toosnaado (yuu-na u yahay).

لِمَنْ شَاءَ مِنْكُمْ أَنْ يَسْتَقِيرَ ﴿٢٨﴾

29. Waxna ma dooni kartaan in Eebaha Caalamku doona mooyee.

وَمَا تَشَاءُ أُولَئِكَ إِلَّا أَنْ يَشَاءَ اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ ﴿٢٩﴾

Xiddigaha iyo khalqiga kalaba dhammaantiis Eebaa abuuray, wuxuuna Eebe ugu dhaartay Qiimohooda iyo say wax la yaab leh u yihiin. Quraankuna waa hadalkii Eebe ee uu malaku Jibrill u soo dhiibay si uu Nabiga Muxammad ah Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee u gaadhsiiyo, isna Caalamka u gudbiyo, waxaana lagu yaqaan Nabiga Ammaan, Run, Caqli iyo gaadhsiin xaqa Sida Nabiyada kaleba. Markay soo dagtay Aayaddan: (Ruuxiinnii doona inuu toosnaado) yuu Abu Jahal yidhi: Amarka annigaa iska leh, haddaan doonno waan toosnaahaynaa, haddaan doonanna ma toosnaayno, markaasaa Eebe soo dajiyay korahaaye (wax ma dooni kartaan in Eebaha Caalamku doono mooyeen). At-Takwiir (15-29).

Suurat Al-Infidhaar



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Markay Samadu dildillaacdo.

إِذَا السَّمَاءُ انْفَطَرَتْ ﴿١﴾

2. Xiddiguhuna daataan. وَلِذَا الْكُوكُوبُ أَنتَثَرَتْ ①
3. Badahana laysku furo. وَلِذَا الْإِجَارُ فُجِرَتْ ②
4. Xabaalahana la soo bixiyo (Dadkii). وَلِذَا الْقُبُورُ بُعِثِرَتْ ③
5. Waxay ogaan nafu waxay hor mar-satay iyo waxay dibmarisay. عَلِمَتْ نَفْسٌ مَّا قَدَّمَتْ وَأَخَّرَتْ ④
6. Dadow maxaa kugu kadiyay Eeba-haaga sharafta leh. يَأْتِيهَا الْإِنْسَانُ مَا غَرَّكَ بِرَبِّكَ الْكَرِيمِ ⑤
7. Ee kii ku abuuray ah kuna ekeeyay kuna simay. الَّذِي خَلَقَكَ فَسَوَّاكَ فَعَدَلَكَ ⑥
8. Siduu doonana kuu sameeyey. فِي أَيِّ صُورَةٍ مَّا شَاءَ رَكَّبَكَ ⑧
9. Saas ma aha ee waxaad beeninaysaan abaal marinta. كَلَّا بَلْ تُكَذِّبُونَ بِالَّذِينَ ④
10. Malaa'ig baana idin ilaalinaysa. وَأَنَّ عَلَيْهِمُ الْقَافِظِينَ ⑩
11. Oo sharaf leh waxna qori. كِرَامًا كَتِيبِينَ ⑪
12. Oгна waxaad falaysaan. يَعْلَمُونَ مَا تَفْعَلُونَ ⑫
13. Kuwa wanaagsani waxay gali Na-ciima. إِنَّ الْأَبْرَارَ لَفِي نَعِيمٍ ⑬
14. Kuwa xun Xunna waxay gali Jaxiimo. وَأَنَّ الْفَجَّارَ لَفِي جَحِيمٍ ⑭
15. Wayna ku guban Maalinta abaal-marinta. يَصَلُّونَهَا يَوْمَ الَّذِينَ ⑮
16. Kamana maqnaadaan Naarta. وَمَا هُمْ عَنْهَا بِغَائِبِينَ ⑯
17. Maalinta abaalmarinta ma taqaan-naa. وَمَا أَدْرَاكَ مَا يَوْمَ الَّذِينَ ⑰
18. Haddana ma taqaannaa Maalinta abaalmarinta. نَوْمًا أَدْرَاكَ مَا يَوْمَ الَّذِينَ ⑱
19. Waa Maalinta ayna u hanannin Nafna Naf kale waxba, Amarkana Maalintaas waxaa iska leh Eebe. يَوْمَ لَا تَمْلِكُ نَفْسٌ لِنَفْسٍ شَيْئًا وَالْأَمْرُ لِقَوْمٍ ذُرِّيَّتِهِ لَمَنِ الْوَسْطَاءُ ⑲

Marka Qiyaamadu dhici waxaa iman doorsoon iyo is baddallo badan, Ruux walbana wuxuu ogaan dhabta, saa darradeed mar haddii Eebe Dadka kulmin, abuurkoodiina wanaajiyay, Caqlina siiyay, Malaa'igna u soo diray og wuxuu fali, Jidkuna Laba yahay, janno iyo Naar, Ruuxna Ruux kale wax u taraynin idan Eebe la'aantiis, amarkana dhammaan Eebe iska leeyahay miyayna habboonayn Eebe aqoonsi, wanaag falid, Xumaan ka tagid iyo u darbasho Maalintaas.

Cadullahi Ibnu Cumar wuxuu ka wariyay Nabiga: «Ruuxii ku farxi inuu Qiyaamaha dhab u arko ha akhriyo (Marka Qorraxda la duubo), Marka Samadu dillilacdo) iyo (marka Samadu jeejxexanto). Al-Infidhaar (1-19).

Suurat Al-Mudhafiifiin

سُورَةُ الْمُطَفِّفِينَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Wuxuu Halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya.

وَيَلِّ لِلْمُطَفِّفِينَ ①

2. Waa kuwa markay miisina oofsada (dhammaystirta).

الَّذِينَ إِذَا أَكَلُوا لَمْ يَكُنِ النَّاسُ يَسْتَفْتُونَ ②

3. Markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya.

وَلَئِن كَانُوا هَرُودًا وَوَلَوْ نُوحًا إِنْ يَخْسِرُونَ ③

4. Miyayna u malaynaynin kuwaasi in loo soo bixin.

أَلَا يَنْظُرُونَ إِلَيْكَ وَتَعْمَلُونَ فِيهِمْ ④

5. Maalin wayn darteed (Qiyaamada).

لِيَوْمٍ عَظِيمٍ ⑤

6. Maalinta Dadku u istaagi Eebaha Caalamka.

يَوْمَ يَقُومُ النَّاسُ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ ⑥

7. Saas ma aha ee Camalka kuwa xun wuxuu ku Qoranyahay Sijiin.

كَلَّا إِنَّ كِتَابَ الْفُجَارِ لَفِي سِجِّينَ ⑦

8. Ma taqaannaa Sijiin.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا سِجِّينَ ⑧

9. Waa Kitaab calaamaysan.

كِتَابٌ مَّرْهُومٌ ⑨

10. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa beeniya (xaqa).

وَيَلِّ يَوْمَئِذٍ لِلْمُكَذِّبِينَ ⑩

11. Ee ah kuwa beeniya Maalinta abaal marinta.

الَّذِينَ يُكَذِّبُونَ بَوْمِ الدِّينِ ⑪

12. Waxaana beeniya xaqa mid xad gudba oo dambiila ah.

وَمَا يَكْتُمُ بِهِ إِلَّا أكلةً مَعْتَدَةً ⑫

13. Marka Quraanka lagu akhriyana yidhaahda waa warkii Dadkii hore.

إِذْ أَنْتَلَى عَلَيْهِ آيَاتُنَا قَالَ أَسْطِيفٌ مِنَ الْأَوَّلِينَ ⑬

Ganacsiga iyo wax kala gadashadu waa xalaal bannaan haddii Jidkeeda la mariyo, waana xaarana xun haddii la Leexiyo oo Dadka lagu boobo. Ruuxiise Eebe ka yaabi iyo hor istaaggiisa Maalinta Qiyaame waa inuu iska Jiraa Ganacsi xun, illeen Eebe Caddibaad daran yuu ugu gooddiyay kuwaase. Nabiguna wuxuu yidhi Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Maalinta Dadku u istaagi waynanka Eebaha Caalamka Maalinta Qiyaame, Dhididkuna Dadkuu xakamayn ilaa uu ka gaadho Dhagahooda».

Waxaa wariyay Imaamu Axmad binu xambal Al-Mudhaffiifin (1-13).

14. Saas ma aha ee waxaa fuulay
Qalbigooda (mirdhiyay) waxay kasban-
jireen oo Dambi ah.

كَلَّا لَإِنَّ رَانَ عَلَى قُلُوبِهِمْ مَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴿١٤﴾

15. Waxaa sugan in Eebhood Maalin-
taas (Qiyaame) laga xijaabi.

كَلَّا أَنْهَرْنَا عَنْ رِيحِهِمْ يَوْمَئِذٍ لَمَحْجُورُونَ ﴿١٥﴾

16. Markaasna ay gali Jaxiimo.

ثُمَّ أَنْهَرْنَا لَأْسَ الْبَاجِرِ ﴿١٦﴾

17. Waxaana loo odhan tani waa
Naartaad ku beeninayseen Adduunka.

ثُمَّ يُقَالُ هَذَا الَّذِي كُنْتُمْ بِهَذَا تَكْتُمُونَ ﴿١٧﴾

18. Saas xaalku ma aha ee Kitaabka iyo
Camalka Dadka Wanaagsan wuxuu ku
Qoranyahay Cilliyiin.

كَلَّا إِنَّ كِتَابَ الْأَنْبِرِ لَفِي عِلِّيِّينَ ﴿١٨﴾

19. Cilliyiin ma taqaannaa.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا عِلِّيُّونَ ﴿١٩﴾

20. Waa Kitaab la Calaameeyay (oo
Dadka fiican magaciisa lagu qoro).

كِتَابٌ مَرْفُوعٌ ﴿٢٠﴾

21. Waxaana Gacanta ku haya Ma-
laa'ig Eebe u dhaw.

يَسْهَرُهُ الْمُرَبُّونَ ﴿٢١﴾

22. Kuwa wanaagsan waxay gali Nacii-
ma (Janno).

إِنَّ الْأَنْبِرَ لَفِي نَعِيمٍ ﴿٢٢﴾

23. (Maalinta Qiyaamana) Sariiro yay
ku dangiigsanaan oy wax ka daawan.

عَلَى الْأَرْبَابِكِ يَنْظُرُونَ ﴿٢٣﴾

24. Wajigooda yaanad ka garan Nic-
mada.

تَعْرِفُ فِي وُجُوهِهِمْ نَضْرَةَ النَّعِيمِ ﴿٢٤﴾

25. Waxaana laga waraabin cabbid la
dhawray (oo macaan).

يَسْتَفْتُونَ مِنْ رَدْمٍ مُنْتَوِمٍ ﴿٢٥﴾

26. Waxaana lagu khatimaa Miski iyo
udgoon, ee Arrintaas ha u tartameen
Tartamayaashu.

حَتَمَهُمْ وَمَسَّكٌ وَفِي ذَلِكَ فَلَيْتَاتٌ تَأْتِيْنَ

الْمُتَشَفِّسَاتِ ﴿٢٦﴾

27. Waxaana lagu dheehi Cabbitaan
sare.

وَمِرَالِحُهُمْ مِنْ سَنِيمٍ ﴿٢٧﴾

28. Waa il ay ka cabbaan kuwa Eebe u dhaw.

عَبَّأَ بِشَرِّهَا الْمُقَرَّبُونَ ﴿٢٨﴾

Dambigu wuxuu halleeeyaa quluubta Dadka, wuxuuna sabab u noqdaa Eebe oo iska xijaaba Ruuxaas, sidaa oo kale wuxuu u hogaamiyaa Dadka Naarta iyo Caddibaad.

Dadkase Eeba addeeca waxay ku raaxaysan Janno iyo cabbid macaan oo xalaal ah iyo aragga Eebahood, waana xaal loo orotamo loona dadaalo. Al-Mudhaffiifiin (14-28).

29. Kuwii Dambaabay (Gaalobay) waxay ahaayeen kuwa ku qosla kuwii xaqa rumeeyay.

إِنَّ الَّذِينَ أُجِرُوا بِكُلِّ آلٍ مِنَ الَّذِينَ ءَامَنُوا يَضْحَكُونَ ﴿٢٩﴾

30. Haday maraanna way xaqirijireen.

وَإِذَا مَرُّوا بِهِمْ يَتَغَامِرُونَ ﴿٣٠﴾

31. Markay Guryahoodii u noqdaanna (gaaladu) waxay noqonjireen iyagoo isla wayn (oo raaxaysan).

وَإِذَا انْقَلَبُوا إِلَىٰ أَهْلِهِمْ انْقَلَبُوا فَكِهِينَ ﴿٣١﴾

32. Markay arkaan Mu'miniintana waxay dhahaan kuwaasi waa dhunsanyihiin.

وَإِذَا رَأَوْهُمْ قَالُوا إِنَّ هَٰؤُلَاءِ لَضَالُّونَ ﴿٣٢﴾

33. Loomana dirin inay ilaaliyaan Mu'miniinta.

وَمَا أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ حَفِظِينَ ﴿٣٣﴾

34. Maalinta (qiyaame) kuwa rumeeyay xaqa waxay ku qosli gaalada.

فَالْيَوْمَ الَّذِينَ ءَامَنُوا مِنَ الْكُفَّارِ

يَضْحَكُونَ ﴿٣٤﴾

35. Sarriro korkood yayna wax ka daawan.

عَلَىٰ الْأَرْيَافِ يَنْظُرُونَ ﴿٣٥﴾

36. Miyaan laga abaalmarinnin Gaalada waxay falayeen. (waa laga abaalmarinay).

هَلْ نُوبِ الْكُفَّارِ مَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ﴿٣٦﴾

Isla waynida iyo kibirka iyo Dadka xaqa rumeeyay oo la xaqiro lana liido waxay dhaxalsiin dulli caddibaad Aakhiro iyo Adduunba, waana shaqada iyo falka kuwa xunxun een Caqliga lahayn. Eeg waxay ku dambeeyeen Ree-Caad, Fircoon, Qoomkii Nabi Nuux, Qureeshtii reer Makaad iyo cid kasta oo isla waynaatay xadna-gudubtay, saa darteed waan in laga digtoonaado falalkaas oo kale, wanaaggana la raaco, illeen waa layska abaal-marin wixii la falayee. Al-Mudhaffiifiin (29-36).

Suurat Al-Inshiqaaq

سُورَةُ الْاِنْشِقَاقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Marka Samadu jeejxexanto (qiyaa-mada).

إِذَا السَّمَاءُ انشَقَّتْ ①

2. Oy Eebe Addeecdo waana xaq addeeciddiisunee.

وَأَذِنَتْ لِرَبِّهَا وَحَقَّتْ ②

3. Marka dhulka la fidi yo (qiyaa-mada).

وَلَا الْأَرْضُ مَدَدَتْ ③

4. Oo uu soo tuuro waxa ku hoos jira, kana madhnaado.

وَأَلْقَتْ مَا فِيهَا وَتَخَلَّتْ ④

5. Oos Eeba Addeeco waana xaq addeeciddaasina.

وَأَذِنَتْ لِرَبِّهَا وَحَقَّتْ ⑤

(wuxuu la kulmi Ruuxwalba Camalkiisa).

6. Dadow waxaad u dhibboon ood u camalfali xagga Eebe, waadna la kulmi.

يَأْتِيهَا الْاِنْسَانُ اِنَّكَ كَادِحٌ اِلَى رَبِّكَ كَدْحًا ⑥
مُتْلَقِيهِ ⑦

7. Ruuxiise Kitaabkiisa (fiican) Midigta laga siiyo (waa mu'minkee).

فَاَمَّا مَنْ اُوْتِيَ كِتَابَهُ بِيَمِينِهِ ⑧

8. Waxaa la xisaabin xisaab fudud.

فَسَوْفَ يَحْصِبُ حَصَابًا اَيْسِرًا ⑨

9. Wuxuuna ku noqon Ciddiisii (Janna-da joogtay) isagoo faraxsan.

وَيُنْقَلِبُ اِلَى اَهْلِهِ مَسْرُورًا ⑩

10. Ruuxiise Kitaabkiisa laga siiyo gadaashiisa (waa Dadka xune).

وَأَمَّا مَنْ اُوْتِيَ كِتَابَهُ وِرْوَالَةً ظَهْرًا ⑪

11. Wuxuu u yeedhan Halaag.

فَسَوْفَ يَدْعُو اُنْبُورًا ⑫

12. Wuxuuna gali Naarta Saciira.

وَيَصِلُ اِسْعِيرًا ⑬

13. Maxaa yeelay Markuu dadkiisii dhexjoogay yuu kibirsanaa (Adduunkii).

اِنَّهٗ كَانَ فِي اَهْلِهِ مَسْرُورًا ⑭

14. Wuxuuna malaynayay inuusan Eebe u soo noqonaynin (qiyaame).

اِنَّهٗ ظَنَّ اَنْ لَّنْ يَحْجُورَ ⑮

15. Saas ma ahee Eebe waa arkaa.

يَلِي اِنَّ رَبَّهٗ كَانَ بَصِيرًا ⑯

Qudrada Eebe iyo Awooddiisu wax walba waa ka sarraysaa, maxaa yeelay isagaa waxwalba ahaysiiyay, wax awooddiisa ka baxsanna ma jiro, Laba Waddo umbaana jira, Ruux walbana wuxuu qaadi Tuu u camal-falo.

Rasuulka Eebana Naxariis iyo nabadgalyana korkiisa Eebe ha yeelee wuxuu yidhi: Idinku Waxaad Falaysaan Camallo aan la Aqoonin, Waxayna U Dhawdahay Inuu U Soo Noqdo Kii Maqnaa Reerkiisii oo uu Farxo Ama Naxo. Waxaa wariyay Dabaraani. Al-Inshiqaaq (1-15).

16. Waxaan ku dhaartay «buu yidhi Eebe» Midabka Qorrax dhaca.

فَلَا أَقِيمُ بِالسَّقِّ ﴿١٦﴾

17. Iyo Habeenka iyo wuxuu qariyay.

وَاللَّيْلِ وَمَا وَسَقَّ ﴿١٧﴾

18. Iyo Dayaxa markuu Nuurku buux Samo.

وَالْقَمَرِ إِذَا أَتَقَّقَ ﴿١٨﴾

19. Ee Dadkow waxaad koraysaan xaalado kala duwan.

لَتَرْكَبُنَّ طَبَقًا عَن طَبِقٍ ﴿١٩﴾

20. Dadka maxaa u sugnaaday oy la rumaynwaayeen (xaqa).

فَمَا لَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٢٠﴾

21. Marka Quraanka lagu akhriyana ayna u sujuudaynin.

وَإِذَا قُرِئَ عَلَيْهِمُ الْقُرْآنُ لَا يَسْجُدُونَ ﴿٢١﴾

22. Saas ma ahee kuwa Gaaloobay waxay beenin (xaqa).

بَلِ الَّذِينَ كَفَرُوا لَيَكْفُرُونَ ﴿٢٢﴾

23. Eebana waa ogyahay waxay qarsan.

وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا تُوعُونَ ﴿٢٣﴾

24. Ugu bishaaree caddibaad daran.

فَيَشِيرُهُمْ بِعَذَابِ الْبُحْرِ ﴿٢٤﴾

25. Hase yeeshee kuwa rumeeyay xaqa camalfiicanna falay waxay mudan Ajri aan go'aynin.

إِلَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ أَجْرٌ غَيْرُ مَمْنُونٍ ﴿٢٥﴾

Eebe wuxuu ku dhaartay in dadku marin xaalado kala duwan, sida yarida, Duqnimada, Caafimaadka, Cudurka, Hodontinimada, Saboolnimada iyo Geerida iyo Nololsha, haddana saas Dadku isagoo arka yuu xaqa beenin oo leexan, Ruuxiise Camal fiican la yimaadda lagama nusqaamiyo ee wuu la kulmi isagoo dhan, Dadkuna shaqay ku dhibboon, waxaana la huraynin la kulanka Eebe. Al-Inshiqaaq (16-25).

Suurat Al-Buruuj

سُورَةُ الْبُرُوجِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Samada

وَالسَّمَاءِ ذَاتِ الْبُرُوجِ ﴿١﴾

Xiddigaha leh (iyo jidadkooda).

2. Iyo Maalinta laysu yaboohay (qiyaamada).

وَالْيَوْمِ الْمَوْعُودِ ②

3. Iyo Dadka joogsan Maalintaas iyo waxyaalaha iman Maalintaas.

وَشَاهِدٍ وَمَشْهُودٍ ③

4. Ee Lacnadi ha ku dhacdo kuwii Godka lahaa (Mu'miniinta lagu caddibo).

فَقِيلَ أَحْسَبُ الْأَعْدُوْدُ ④

5. Ee ahaa Naar olal (iyo shidaal) leh.

النَّارِ ذَاتِ الْوُجُوْدِ ⑤

6. Gaaladiina ay korfadhiyeen Godka.

إِذْهُمْ عَلَيْهَا فُعُوْدٌ ⑥

7. iyagoo daawan waxa lagu falii Mu'miniinta «oo Jirrabaad ah».

وَهُمْ عَلَى مَا يَفْعَلُوْنَ بِالْمُؤْمِنِيْنَ شُهُُوْدٌ ⑦

8. Waxay ku neceen Dadkaasna ma jiro oon ahayn inay rumeeyeen Eebaha adkaada ee la mahadiyo.

وَمَا نَقَمُوْا مِنْهُمْ إِلَّا أَنْ يُؤْمِنُوْا بِاللّٰهِ الْعَزِيْزِ

الْحَمِيْدِ ⑧

9. Ee leh Samada iyo Dhulka xukunkooda, Eebana wax walba wuu ujeedaa.

الَّذِيْ لَهُ مُلْكُ السَّمٰوٰتِ وَالْاَرْضِ وَاللّٰهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ

شٰهِيْدٌ ⑨

10. Kuwa Mu'miniinta Rag iyo Haweenba jirraaba haddana aan tawbadkeenin waxay mudan Caddibaadda Jahannamo iyo caddibaad gubi.

إِنَّ الَّذِيْنَ فَتَنُوْا الْمُؤْمِنِيْنَ وَالْمُؤْمِنٰتِ دُوْرًا رَّبُّوْا فَلَهُمْ

عَذٰبٌ جَهَنَّمَ وَلَهُمْ عَذٰبُ الْحَرِيْمِ ⑩

Suuraddani waa Suurad wayn oo la yaableh kana qisoon inay jirtay in nin xun oo Gaal ah xukumi jiray dad, haseyeeshee Dadkii qaarkii ay xaqa rumeeyeen, markaas uu faray ciidammadiisii in God Dab lagu shido, Ruuxii Diinta ka bixi waayana lagu tuuro, isaga iyo Colkiisiina ay daawanayeen, hase-yeeshee Mu'miniintii xaqiibay ku sugnaa-deen si kastoo loo caddibay, taasina waxay ku tusin ku sugnaanta xaqa iyo adkaysiga si kastoo dhib kuu soo qaabilo. Al-Buruuj (1-10).

11. Kuwa xaqa rumeeyey Camalfiican-na falay waxay mudan Jannooyin ay dureeri dhexdeeda Wabiyaal, taasina waa liibaan wayn.

إِنَّ الَّذِيْنَ ءَامَنُوْا وَعَمِلُوا الصّٰلِحٰتِ لَهُمْ جَنٰتٌ

تَجْرِيْ مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهٰرُ ذٰلِكَ الْفَوْزُ الْكَبِيْرُ ⑪

12. Qabashada Eebana (Ciqaabtiisu) way darantahay.

إِنَّ بَطْشَ رَبِّكَ لَشَدِيْدٌ ⑫

13. Eebe isagaa khalqiga ahaysiiyay soona celin.

إِنَّهُ هُوَ بَدِيْءُ وَيْعُدُّ ⑬

14. Waana dambidhaaf badane jecel (kuwa addeeca). وَهُوَ الْعَفْوَ وَالْوَدُودُ ١٤
15. Carshiga sharafta lahna isagaa iska leh. دُؤَالِ الْعَرْشِ الْمَجِيدِ ١٥
16. Wuuna falaa wuxuu doono. فَعَالٌ لَّمَّا يَرِيدُ ١٦
17. Ma ku soo gaadhay warkii Junuud-dii (Gaaladii). هَلْ أَتَاكَ حَدِيثُ الْجُنُودِ ١٧
18. Fircoon iyo Thamuud. فِرْعَوْنَ وَثَمُودَ ١٨
19. Hase yeeshee kuwii Gaaloobay waxay ku suganyihiin beenin (xaqa). بَلِ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي تَكْذِيبٍ ١٩
20. Eebana waa koobay (kamana bax-sadaan). وَاللَّهُ مِنْ وَرَائِهِمْ مُحِيطٌ ٢٠
21. Waase Quraan sharaf leh. بَلْ هُوَ قُرْآنٌ مَجِيدٌ ٢١
22. Oo ku Qoran loox la dhawray (looxulmaxfuudka). فِي لَوْحٍ مَّحْفُوظٍ ٢٢

Kuwa xaqa rumeeyay oo Camal fiican fala Janno iyo wanaagbaa u dambeeya waana liibaan wayn, Eebana wuxuu doonuu sameeyaa, waana awood waynyahay, Gaaladii iyo xaq-diidayaashiina waa kii ciqaabay, Waxay Gaaladu beeninna waa uun Quraan sharaf leh oo la dhawray. Xasan Albisri wuxuu yidhi: Quraanka sharafta leh wuxuu ku suganyahay Eeba Agtiisa Looxulmaxfuudka, wuxuuna ka soo dajin wuxuu doono, kuna dajin cidduu doono oo khaliqigiisa ah. Al-Buruuj (11-22).

Suurat Adh-Dhaariq

سُورَةُ الطَّارِقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Samada iyo Xiddigga guura. وَالسَّمَاءِ وَالطَّارِقِ ١
2. Ma taqaan Xiddigga guura. وَمَا أَدْرَاكَ مَا الطَّارِقُ ٢
3. Waa Xiddig ifa. النَّجْمِ الثَّاقِبِ ٣

4. Ee Nafwalba waxaa kor jooga ilaaliye (Malag). إِنَّ كُلَّ نَفْسٍ لَّمَّا عَلِمَتْهَا إِفْطٌ ④
5. Ee Dadku ha dayo waxa laga abuuray. فَلْيَنْظُرِ الْإِنْسَانُ وَمِمَّ خُلِقَ ⑤
6. Waxaa laga abuuray Biyo booda. خُلِقَ مِنْ مَّاءٍ دَافِقٍ ⑥
7. Kana soobaxa Dhabar iyo laab dhexdood. يَخْرُجُ مِنْ بَيْنِ الصُّلْبِ وَالتَّرَائِبِ ⑦
8. Eebana waa karaa soo celinta Dadka (qiyaamada). إِنَّهُ عَلَى رَجْعِهِ لَقَادِرٌ ⑧
9. Maalinta la imtixaani waxa (Laabta) ku qarsoon. يَوْمَ تُبْطِئُ التَّرَائِبُ ⑨
10. Dadkuna Xoog ma leh (Maalintaas) iyo wax u gargaara midna. فَأَلَّهُ مِنْ قُوَّةٍ وَلَا نَاصِرٍ ⑩
11. Eebana wuxuu ku dhaartay Samada Roobka leh. وَالسَّمَاءِ ذَاتِ الرَّجْعِ ⑪
12. Iyo Dhulka jeexma (waxna ka soo baxo). وَالْأَرْضِ ذَاتِ الصَّدْعِ ⑫
13. Ee Quraanku waa hadal wax kala bixiya (wanaagga iyo Xumaanta). إِنَّهُ لَقَوْلُ فَصْلٍ ⑬
14. Ciyaarra ma aha (ee waa dhab). وَمَا هُوَ إِلَّا هَزْلٌ ⑭
15. Gaaladu waxbay dhakri. إِنَّهُمْ يَكِيدُونَ كَيْدًا ⑮
16. Annagu waanu dhakri dhagar (booskeedi dhacday). وَاصِيدٌ كَيْدًا ⑯
17. Ee u sug Gaalada wax yar. فَهَلِ الْكَافِرِينَ أَهْمُهَا تُرْوَدُونَ ⑰

Suurat Al-Aclaa

سُورَةُ الْأَعْلَى

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waynee Magaca Eebe ee Sarreeya.
2. Eebaha abuuray khalqiga ekeeyayna.
3. Eebaha wax walba qaddaray Jidkana tusiyey.
4. Eebaha soo bixiya Daaqa.
5. Kana dhiga markaas ka dib caws ingagagan oo Madow.
6. Waxaan kuu akhriyaynaa Quraanka halmaaminamaysid.
7. Wuxuu Eebe doono mooyee, Eebana waa ogyahay waxa muuqda iyo waxa qarsoonba.
8. Waxaana kuu fududaynaynaa Waddo fiican.
9. Ee wax waani (Nabiyow) hadday wax tari waanadu.
10. Waxaa waantoobi Ruuxa Eebe ka yaabee.
11. Waxaana ka fogaan waanada Ruuxa xune.
12. Ee ah mid gali Naar wayn.
13. Oon kuna dhimanayn dhexdeeda kuna noolaanayn.
14. Waxaana liibaanay Ruuxii Daahir noqda.
15. magaca Eebana Xusa, Salaaddana tukada.
16. Saas ma'aha ee Dadku wuxuu doortay nolosha Adduuno ee dhaw.

سَبِّحْ اسْمَ رَبِّكَ الْأَعْلَى ①

الَّذِي خَلَقَ فَسَوَّى ②

وَالَّذِي قَدَّرَ فَهَدَى ③

وَالَّذِي أَخْرَجَ الْمَرْعَى ④

فَجَعَلَهُ غُثَاءً أَحْوَى ⑤

سُنُقِرُكَ فَمَا تَسْمَى ⑥

إِلَّا مَا شَاءَ اللَّهُ إِنَّهُ يَعْلَمُ الْجَهْرَ وَمَا يَخْفَى ⑦

وَيُبَيِّنُكَ لِلبَشَرَى ⑧

فَذَكِّرْ إِنْ نَفَعَتِ الذِّكْرَى ⑨

سَيَذَكِّرْ مَنْ يَخْشَى ⑩

وَوَجَّهَهَا إِلَى الشَّقَى ⑪

الَّذِي صَلَّى النَّارَ الْكُبْرَى ⑫

ثُمَّ لَا يَمُوتُ فِيهَا وَلَا يَحْيَى ⑬

فَدَأْفَعْ مَنْ تَرَكَى ⑭

وَذَكِّرْ اسْمَ رَبِّهِ فَصَلَّى ⑮

بَلْ يُؤْمِرُونَ الْحَيَاةَ الدُّنْيَا ⑯

17. Aakhiraase khayr badan baaqina ah (hadhi).

وَالْآخِرَةُ خَيْرٌ وَأَثَقَ ﴿١٧﴾

18. Arrintaasuna waxay ku sugantahay Kutubtii hore.

إِنَّ هَذَا لَفِي الصُّحُفِ الْأُولَىٰ ﴿١٨﴾

19. Kutubtii (Nabi) Ibraahim iyo (Nabi) Muuse.

صُّحُفِ إِبْرَاهِيمَ وَمُوسَىٰ ﴿١٩﴾

Eebaa sharaf badan, Magaciisuna sidoo kale waa sharaf badanyahay, wax walbana isagaa qadaray, Jidkana isagaa kala caddeeyay, Ruuxii fiicanna tan sanbuu qaadi, Ruuxii xunna tan daran bu qaadi, wuxuuna ku noolaan maddisha ma noolayso, Liibaan waxaa leh Ruuxii Mu'min noqda xuska Eebe iyo Salaaddiisana badiya, nolosha Adduunyana ayna khaldin, illeen Aakharaa fiicane, Waxaa la soo sheegayna waxay ku sugnayd Kutubihii hore, Sida: kii Nabi Ibraahim iyo Nabi Muuse. Saxiixu Muslim waxaa ku sugnaaday: «Eebe wuu qaddaray maamulka khalqiga Abuuridda Samaawaadka iyo dhulka ka hore Konton Kun oo Sano, Carshigiisuna wuxuu aha Biyaha korkooda». Al-Aclaa (1-19).

Suurat Al-Ghaashiyah



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ma ku soo gaadhay Qiyaamada warkeedii.

هَلْ أَتَاكَ حَدِيثُ الْغَاشِيَةِ ﴿١﴾

2. Wajiyaal Maalintaas way dullaysnaan.

وَجُودٌ بِوَمِيذٍ خَشَعَةٌ ﴿٢﴾

3. Waxayna qaban Shaqo dhib ah.

عَامِلَةٌ تَأْتِبَةٌ ﴿٣﴾

4. Waxayna gali Naar kulul.

تَصَلَّىٰ نَارًا كَامِيَةً ﴿٤﴾

5. Waxaana laga waraabin il kulayl daran.

تَسْقَىٰ مِنْ عَيْنٍ آسِيَةٍ ﴿٥﴾

6. Wax cunto ahna kama helaan oon ahayn cunno xun (oo wax dhibta).

لَيْسَ لَهُمْ طَعَامٌ إِلَّا مِنْ صَرِيمٍ ﴿٦﴾

7. Taasoon waxna cayilnaynin Gaajana wax ka taraynin.

لَا يَسْمِنُ وَلَا يُغْنِي مِنْ جُوعٍ ﴿٧﴾

8. Wajiyaalna maalintaas way Nicmaysnaan (Waa mu'miniinta).

وَجُودٌ بِوَمِيذٍ نَاعِمَةٍ ﴿٨﴾

9. Waxayna ka raalli noqotay camal-keedii.

لَسَعِيهَا رَاضِيَةٌ ﴿٩﴾

10. Janno sarana way gali.

فِي جَنَّةٍ عَالِيَةٍ ﴿١٠﴾

11. Kumana maqasho Jannada hadal macna daroo.

لَأَسْمَعَنَّ فِيهَا النِّعَةَ ﴿١١﴾

12. Waxaana ah dhexdeeda il socota.

فِيهَا عَيْنٌ جَارِيَةٌ ﴿١٢﴾

13. Iyo Sariiro la koryeelay.

فِيهَا سُرُورٌ مَرْفُوعَةٌ ﴿١٣﴾

14. Iyo koobab la hor dhigay (ehlu Jannaha).

وَأَكْوَابٌ مَوْضُوعَةٌ ﴿١٤﴾

15. Iyo Barkimooyin la safay.

وَنَارٌ مَصْفُوفَةٌ ﴿١٥﴾

16. Iyo gogol la fidiyay.

وَزُرِّيٌّ مُسَوِّفَةٌ ﴿١٦﴾

Qiyaamada iyo sida Dadku u Qaybsami laba waddana u kala qaadi, iyo Jannada iyo wanaaggeeda, iyo Naarta iyo xumaanteeda, wax badanbuu Quraanku ka hadlay, waxaase loo baahanyahay uun in loo darbado, wanaaggana la falo, xumaantana laga tago.

Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi: Naxariis iyo nabadgalyana korkiisa Eeba ha yeelee: «war ma jiraa Ruux u tafa xaydan jannada, jannadu khatar ma lehee, Eebaha kacbaadan ku dhaartaye waa Nuur ifi, udgoon gilgilan, sar la qurxiyay, wabi socda, midho bisil, haweeney wanaagsan oo quruxsan, labbis badan, iyo nagaadi waligeed ah oo daar Nabad-Gashay, iyo faakihad iyo khudaar iyo farax iyo nicmo, meel sare oo quruxsan «markaasay dheheen: haa Rasuulki Eebow annagaa u tafaxaydan, markaasuu yidhi: «Dhaha: Hadduu Eebe Doono» markaasay qoomkii dheheen hadduu Eebe doono. Waxaa wariyay Ibnu Maaajah. Al-Ghaashiyah (1-16).

17. Miyayna fiirinaynin sida Geela loo abuuray.

أَفَلَا يَنْظُرُونَ إِلَى الْإِبِلِ كَيْفَ خُلِقَتْ ﴿١٧﴾

18. Iyo sidda Samada loo koryeelay.

وَأَلَى السَّمَاءِ كَيْفَ رُفِعَتْ ﴿١٨﴾

19. Iyo sida Buuraha loo taagay.

وَأَلَى الْجِبَالِ كَيْفَ نُصِبَتْ ﴿١٩﴾

20. Iyo sida dhulka loo fidiyay.

وَأَلَى الْأَرْضِ كَيْفَ سُطِحَتْ ﴿٢٠﴾

21. Ee Waani dadka waxaad tahay waaniyee (Nabiyow).

فَذَكِّرْ إِنَّمَا أَنْتَ مُذَكِّرٌ ﴿٢١﴾

22. Mana tihid mid xoog ku leh (qasab).

لَسْتَ عَلَيْهِمْ بِمُصَيْطِرٍ ﴿٢٢﴾

23. Hase yeeshee Ruuxii xaqa ka jeedsada oo Gaalooba (ku soo celi xaqa).

إِلَّا مَن قَوْلٍ وَكَفَرَ ﴿٢٣﴾

24. Eebana wuu caddibi Caddibaadda u wayn.

فَعَذِّبُهُ اللَّهُ الْعَذَابَ الْأَكْبَرَ ﴿٢٤﴾

25. Xagganagayna u soo noqon (khal-qigu).

إِنَّا إِلَهَاتُ آيَاتِهِمْ ﴿٥٥﴾

26. Annagaana xisaabin.

تُؤْمِنُ عَلَىٰ تَاجِسَاتِهِمْ ﴿٥٦﴾

Waa in la fiiriyaa khalqiga Eebe laguna waana qaataa, Sida Cirka, Dhulka, Buuraha, Geela iyo Makhluuqaadka kalaba, Diinta Islaamkuna ma'aha qasab iyo dirqi ee waa uun waano, hase yeeshee Ruuxii xadgudba oo fasahaad la socda waa la qaban, isagooy u dambayso tii Aakhirana, Hadalla wuxuu ku dhanyahay in Eeba loo noqon uuna xisaabin.

Waxaa laga wariyay Abuu UMAAME inuu maray Khaalid Bini Yaziid Binu Macaawiye, markaasuu waydiiyay Kalimaddii ugu jilicsanayd ees ka maqlay Rasuulkii- Eebe (Ammaan iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee), wuxuuna yidhi: waxaan Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha yeelee: Maqlay isagoo leh: «Dhammaantiin Jannadaad Galaysaan Ruux Eeba Ka Carara Mooyeen Sida Neef Geela Ehelkiisa Uga Cararo». waxaa wariyay Imaamu Axmad. Al-Ghaashiyah (17-26).

Suurat Al-Fajr

سُورَةُ الْفَجْرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaaraty Waabariga.

وَالْفَجْرِ ﴿١﴾

2. Iyo Habeennada Tobanka ah (Carrafo).

وَلَيْلٍ إِعْشَرَ ﴿٢﴾

3. Iyo Tirada siman iyo tan is dheer.

وَالشَّفْعِ وَالْوَتْرِ ﴿٣﴾

4. Iyo Habeenku markuu tagayo.

وَاللَّيْلِ إِذَا يَأْسَرُ ﴿٤﴾

5. Miyayna arrintaasu ahayn wax loogu dhaarto Qof caqli leh.

هَلْ فِي ذَلِكَ قَسَمٌ لِذِي حِجْرِ ﴿٥﴾

6. Ma ku soo Gaadhay sida Eebahaa ku falay Caad.

أَلَمْ تَرَ كَيْفَ فَعَلَ رَبُّكَ بِعَادٍ ﴿٦﴾

7. Ee ahaa Irama xooggana lahaa.

إِذْ مَكَانِ الْعَمَادِ ﴿٧﴾

8. Wax la mid ahna aan lugu abuurin dhulka.

أَلَمْ يَلْبَسْ لَبَاسًا فِي الْيَلْدِ ﴿٨﴾

9. Iyo Thamuud-kii ahaa dhagaxa kuwa ku jarjara Waadiga.

وَتَمُودَ الَّذِي جَاءَ بِالصَّخْرِ بِالْوَادِ ﴿٩﴾

10. Iyo Fircoonkii dhakaywada lahaa.

وَفِرْعَوْنَ ذِي الْأَوْتَادِ ﴿١٠﴾

11. kuwiina ahaa ku xadgudbay dhulka.
 12. Kuna badiyay dhexdiisa fasaadka.
 13. Markaasaana Eeba ku shubay Caddibaad daran.
 14. Maxaayecelay Eebe waa u darbanyahay (abaalmarinta).

الَّذِينَ طَعَوْا فِي الْيَلْدِ ۝١١

فَأَكْفَرُوا فِيهَا الْفَسَادَ ۝١٢

فَصَبَّ عَلَيْهِمْ رَبُّكَ سَوْطَ عَذَابٍ ۝١٣

إِنَّ رَبَّكَ لِيَا لَمْرَصَادٍ ۝١٤

Eebe wuxuu abaal-mariyay halaagayna kuwii Xaq-diidayaasha ahaa Nabiyadana becniyay, isna biday xoog iyo tabar, Ruux kastoo is kibriyana oo xumaan iyo fasaad dhulka ku sameeyana wuxuu la kulmi waxay la kulmeen, wuxuuna ka cabii weelkay ka cabbeen, taasina waa Sunnada Eebe wax baddalina ma jiro. Al-Fajr (1-14).

15. Marka Eebe Dadka imtixaano xoolana ugu nicmeeyo wuxuu dhihi (kan xun) waa la i sharrifay (isagoo faani).

فَأَمَّا الْإِنْسَانُ إِذَا مَا ابْتَلَيْنَاهُ رَبُّهُ، فَآكَرَمَهُ، وَنَعَّمَهُ،

فَيَقُولُ رَبِّي أَكْرَمَنِ ۝١٥

16. Haddiise Eebe imtixaano oo Xoolaha ku yareeyo wuxuu dhihi Eebaa i dulleeyay.

وَأَمَّا إِذَا مَا ابْتَلَيْنَاهُ فَقَدَرَ عَلَيْهِ رِزْقَهُ، فَيَقُولُ رَبِّي أَهْدَنِي ۝١٦

17. Saas ma aha ee waxaydaan dhaqaalaynayn Agoonka.

كَأَن لَّمْ يَلْمُوكُمُ الْيَتِيمَ ۝١٧

18. Mana fartaan in masaakiinta wax la siiyo.

وَلَا تَحْتَضِرُونَ عَلَىٰ طَعَامِ الْمَسْكِينِ ۝١٨

19. Waxaadna aad u cuntaan dhaxal xaq darro.

وَأَكْأَلُونَ الْبُرْجَانَ أَكْأَلْنَا ۝١٩

20. Xoolahana waxaad u jeceshihiin si daran.

وَتُحِبُّونَ الْمَالَ حُبَّاجْمَا ۝٢٠

21. Saas ma aha ee marka dhulka la burburiyo.

كَلَّا إِذَا دُكَّتِ الْأَرْضُ دَكًّا دَكًّا ۝٢١

22. oo uu yimaado Alle, malaa'igtuna timaado iyadoo saf saf ah.

وَجَاءَ رَبُّكَ وَالْمَلَكُ صَفًّا صَفًّا ۝٢٢

23. Naarta Jahannamana Maalintaas la keeno, Dadku waxay xusuusan waxay faleen, Maxayse xusuusi tari.

وَجَاءَ يَوْمَ يُنْفَخُ الْعِهَادُ يَوْمَ يُبَيِّنُ وَنُوحِيهِمْ وَيَتَذَكَّرُ الْإِنْسَانُ

وَأَن لَّهُ الذِّكْرَىٰ ۝٢٣

24. Waxay dhihi shallaytee maan wa-naag hormarsado.

يَقُولُ يَا لَيْتَنِي قَدَّمْتُ لِحَيَاتِي ۝٢٤

25. Maalintaas sida Eebe wax ruux u Cadaabi ma jiro.

﴿فَيَوْمَئِذٍ لَا يُعَذِّبُ عَذَابَهُ أَحَدٌ﴾

26. Wax sida Eebe wax u xidhina ma jiro.

﴿وَلَا يُؤْتِيهِمْ وَفَاءَهُ أَحَدٌ﴾

27. Naftase xaqa rumaysay ee Xasilloo-neey.

﴿يَأْتِيهَا النَّفْسُ الْمُظْمِئَةُ﴾

28. U noqo Eebahaa adoo raalli ah lagana raalli noqday.

﴿أَرْجِعْ إِلَىٰ رَبِّكَ رَاضِيَةً مُّرْضِيَةً﴾

29. dhexgalna Addoomadayda (wanaagsan).

﴿فَأَدْحُلِّي فِي عِبْدِي﴾

30. Galna Jannadayda.

﴿وَأَدْحُلِّي حَتَّىٰ﴾

Xoola badnida iyo Saboolnimaduba waa imtixaan Eebe, mana aha Jacayl Eebe iyo nebcaansho midna, Saas daraaddeed waa in wax bixinta lays falo, lana dhaqaaleeyo Agoonta iyo Masaakiinta, Booli cuniddana layska jiro.

Nabiguna wuxuu yidhi «Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelec: «Guriga ugu khayrbadan Muslimiinta wa Guriga Agoon loogu sama falo, Guriga ugu sharbadan muslimiintana waa guri Agoon lagu xumeeyo». Waxaa laga wariyay Cabdullaahi Ibnu Mubaarak.

Saa daraaddeed waa in wanaag la hor marsadaa si raalli aha anshaha Eebe iyo Jannadiisa loo helo iyo Naf xasilloon, illen Qiyaame iyo xisaabaa dambaysee. Al-Fajr (15-30).

Suurat Al-Balad

سُورَةُ الْبَلَدِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaaran Magaalada «Makaad ee Sharrifan».

﴿لَا أُنسِمُ بِهِدَا الْبَلَدِ﴾

2. Ood Nabiyouw daggantahay dhexdeeda.

﴿وَأَنْتَ حَلٌّ بِهِدَا الْبَلَدِ﴾

3. Iyo Nabi Aadam iyo carruurtiisa «Dadka».

﴿وَالِدٍ وَمَا وَلَدٌ﴾

4. Ee Eebe Dadka wuuu Abuuray iyagoo dhib iyo shaqo (Adduunka kala kulmi).

﴿لَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ فِي كَبَدٍ﴾

5. Ma waxayse u maleeyeen inaan cidna awood ku lahayn (dadku).

أَيَحْسَبُ أَنْ لَنْ يَقْدِرَ عَلَيْهِ أَحَدٌ ﴿٥﴾

6. Dadka (Gaalada) waxay odhan waxaan bixiyey xoolo badan (si xaqa loo horjoogsado).

يَقُولُ أَهْلَكُ مَا لَأَبَدًا ﴿٦﴾

7. Ma wuxuu u maleeyay (xaq diiduhu) inaan cidna arkaynin.

أَيَحْسَبُ أَنْ لَنْ يَرَهُ أَحَدٌ ﴿٧﴾

8. Miyaannaan u yeelin Laba indhood.

أَلَنْ نَجْعَلَ لَهُ عَيْنَيْنِ ﴿٨﴾

9. Iyo Carrab iyo Laba bishimood.

وَلِسَانًا وَشَفَتَيْنِ ﴿٩﴾

10. Oo miyaannaan u caddaynin Labada Jid (khayrka iyo sharka).

وَهَدْيَيْنَهُ النَّجْدَيْنِ ﴿١٠﴾

Magaalada Maka yuu Eebe ku dhaartay, maxaayeelay waa Magaalo barakaysan Quraankana lagu soo dajiyay, Nabigana laga bixiyay, Kacbaduna ku taallo, Saas darteed waa in la wayneeyo, Addunkuna waa halgan iyo dhib, waase in xaqa la raaca loona adkaaysta bixinta xooluhuna waa inay ahaataa dar Eebe, maxaayeelay? Eebe wuxuu inagu galladaystay nicmooyin badan, sida: Indhaha, Caqliga, Afka, Carrabka, iyo bishimaha, si aad wanaag ugu hadashid, waddadana Eebe waa ina tusiyay, si aan Jidka wanaagga u qaadno kan xunna uga leexanno.

Nabiguna wuxuu yidhi Naxaris iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee: «Baladkan Eebe Wuu Xaaraam Yeelay Maalintuu Abuuray Samaawaadka iyo Dhulka, Waana Xaaraam Sida Eebe U Xarrimay Ilaa Qiyaamada, Geedkiisa Lama Rujiyo, waxaase la iibanneyay Saacad Maalin ka mid ah, Iyaduna waxay ku noqotay Xaaraamnimaadeedii Shalay oo kale, ha Gaadhsiiyo Midka jooga kan Maqan». Waxaa wariyay Muslim iyo bukhaari iyo Kutubta Sunnada ee kale. Al-Balad (1-10).

11. Ee dadku muu jiidho Jiirta.

فَلَا أَقْصَمَ الْعَقَبَةَ ﴿١١﴾

12. Ma taqaanna Jiirta.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْعَقَبَةُ ﴿١٢﴾

13. Waa qoor la xoreeyo.

فَأَنْ رَقَبَتِهِ ﴿١٣﴾

14. Iyo cunno la siiyo maalin gaajo.

أَوْ اطْعَمْتُمْ فِي يَوْمٍ ذِي مَسْعَبَةٍ ﴿١٤﴾

15. Agoon kuu dhaw.

يَتَّبِعَانِي مَا مَقْرَبَةٌ ﴿١٥﴾

16. Ama Miskiin Dhulka ku dhagay (dhibaato darteed).

أَوْ مَسْكِينًا إِذَا مَنَّتُمْ ﴿١٦﴾

17. Markaas la noqdo kuwa Rumeeyay xaqa, isuna dardaarma Samirka, isuna dardaarma naxariista.

ثُمَّ كَانَ مِنَ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَتَوَصَّوْا بِالصَّبْرِ ﴿١٧﴾

وَتَوَصَّوْا بِالْمَرْحَمَةِ ﴿١٧﴾


18. Kuwaasina waa kuwa Midigta mari.

أُولَئِكَ أَصْحَابُ الْمَيْمَنَةِ ﴿١٨﴾

19. Kuwa ka Gaaloobayse Ayaadkan-naga waa kuwa jidka xun mari.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا بِعَاقِبَاتِنَا هُمْ أَصْحَابُ الْمَشْأَمَةِ ﴿١٩﴾

20. Waxaana lagu dabooli Naar.



Qiimaha noloshu waa in Ruuxu halgamo xaqana raaco, dhibka halgankaasna u adkaysto, Dadka goommoonna wax ku taro, Gaar ahaan Agoonta iyo Masaakiinta, si markaas Ruuxu uga mid noqdo kuwa sama falay ee samirka iyo naxariista is fara, Jidka wanaagsanna qaada xumaanna ka taga. Rasuulkuna wuxuu yidhi «Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee: «Ruuxaan U Naxariisaniin Kaannaga yar Oqoonsanninna xaqa ka wayn, naga mid ma aha». Waxaa wariyay Abu Daawuud. Al-Balad (11-20).

Suurat Ash-Shams



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Qorraxda iyo Barqinkeeda.
2. Iyo Dayuxu markuu Qorraxda raaco.
3. Iyo Maalintu markay ifiso.
4. Iyo Habeenku markuu daboolo (madoobaado).
5. Iyo Samada iyo say u dhisantahay.
6. Iyo Dhulka iyo suu u fidsanyahay.
7. Iyo Nafta iyo sida Eebe u ekeeyay.
8. Una tusiyay Jidka xun iyo ka Eebe kayaabiddaba.
9. Ee waxaa liibaanay Ruxii Naftiisa Daahiriya.
10. Waxaana khasaaray Ruuxii Naftiisa xumaan dhex galiya.
11. Thamuud waxay beeniyeen (xaqii) kibir dartiis.
12. Markuu tagay koodii xumaa (si uu hashu u dilo).
13. Oo Rasuulkii Eebana ku yidhi, iska

وَالشَّمْسِ وَضُحَاهَا ①

وَالْقَمَرِ إِذَا تَلَّهَا ②

وَالنَّهَارِ إِذَا تَجَلَّىٰهَا ③

وَاللَّيْلِ إِذَا يَغْشَىٰهَا ④

وَالسَّمَاءِ وَمَا بَدَنَهَا ⑤

وَالْأَرْضِ وَمَا طَحَنَهَا ⑥

وَنَفْسٍ وَمَا سَوَّاهَا ⑦

فَأَلَّهَمَّهَا فُجُورَهَا وَتَقْوَاهَا ⑧

قَدْ أَفْلَحَ مَنْ رَزَقَهَا ⑨

وَقَدْ خَابَ مَنْ دَسَّاهَا ⑩

كَذَّبَتْ ثَمُودُ بِطَغْوَاهَا ⑪

إِذِ ابْنَعَتْ آسَفَقَاهَا ⑫

فَقَالَ لَهُمْ رَسُولُ اللَّهِ نَاقَةَ اللَّهِ وَسُقْيَاهَا ⑬

daaya Hasha Eebe iyo Cabbiddeeda.

14. Wayna beeniyeen Rasuulkii Hashii-
na way Dileen markaasaa Eebe si daran
u caddibay Dambigooda dartiis.

فَكَذَّبُوهُ فَعَقَرُوهُ فَاقْتَدِمُوا عَلَيْهِمْ رُبُّهُمْ يَدَّيْنِهِمْ
فَسَوَّاهَا ﴿١٤﴾

15. Isagoon Eebe ka yaabaynin cidhib
(iyo wax yeello).

وَلَا يَخَافُ عُقْبَاهَا ﴿١٥﴾

Eebe wuxuu ku dhaartay Todobo Arrimood oo Suuraddan ka mid ah, in Ruuxii xaqa ku toosnaada uu liibaani, kii Jidka xun qaadana uu khasaari, isla waynida Dambiga, iyo xaq-diidnimaduna sabab u noqoto Halaay iyo ciqaab.

Rasuulkuna wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee»: «Ruux kastoo oo la dhalo waxaa lagu dhalaal Fidrada (Islaamka), waxaa kale oo uu dhihi jiray isagoo sujuudsan: «Eebow sii Naftayda Cabsideeda, Daahirna yeel adaa u khayr badan ku wax Daahiriye, Adigaa wali u Ah Sayidkeedana ah». Waxaa wariyay Imaam Axmed. Ash-Shams (1-15).

Suurat Al-Layl

سُورَةُ اللَّيْلِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee
naxariis guud iyo mid gaaraba naxa-
riista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Habeenku
markuu wax qariyo.

وَاللَّيْلِ إِذَا يَغْشَى ﴿١﴾

2. Iyo markay Maalintu Muuqato (if-
to).

وَالنَّهَارِ إِذَا تَجَلَّى ﴿٢﴾

3. Iyo Abuuridda Dadka Lab iyo
dhaddigba.

وَمَا خَلَقَ الذَّكَرَ وَالْأُنثَى ﴿٣﴾

4. In Camalkiinnu (dadow) kala duwa-
nyahay.

إِنْ سَعَى كُفْرًا لَنَسَى ﴿٤﴾

5. Ruuxiise bixiya (xuquuqda) Eebana
ka dhawrsada.

فَأَمَّا مَنْ أَعْطَى وَاتَّقَى ﴿٥﴾

6. Rumeeyana tii wanaaga badnayd
(ciwal).

وَصَدَّقَ بِالْحُسْنَى ﴿٦﴾

7. Waxaannu u fududaynaa wanaagga
(iyo Jidka fiican).

فَسَيُسِّرُهَا لِلْيُسْرَى ﴿٧﴾

8. Ruuxiise ku bakhayla Xoolaha isna
deeqtoonaysiia «iskibriya».

وَأَمَّا مَنْ يُجِلْ وَأَسْتَعَى ﴿٨﴾

9. Beeniyana Tii wanaaga badnayd (ciwal).

وَكَذَّبَ بِالْحَسَنَى ⑩

10. Waxaan u fududaynaa Jidka xun.

فَسَيَّبِرُهُ الْعُسْرَى ⑪

11. Xoolihiisuna wax uma taraan mar-kuu halaagsamo.

وَمَا بَقِيَ عَنْهُ مَالٌ إِذَا تَرَدَّى ⑫

12. Annagaa wax hannuninna.

إِنَّ عَلَيْنَا لَلْهُنَى ⑬

13. Aakhariyo Addunbana Annagaa iska leh.

وَإِن لَّنَا الْآخِرَةُ وَالْأُولَى ⑭

14. Waxaana idiinka digaynaa Naar kulayl daran.

فَأَنْذَرْتُكُمْ نَارًا تَلَظَّى ⑮

15. Oosan galaynin Ruux xun mooyeen.

لَا يَصْلُهَا إِلَّا الْأَشْقَى ⑯

16. Oo xaqa beeniyay jeedsadayna.

الَّذِي كَذَّبَ وَتَوَلَّى ⑰

17. Waxaana ka fogaada (galidda naarta) Ruuxii Eeba ka dhawrsada.

وَسَيَجْزِيهَا الْآتَقَى ⑱

18. Ee bixiya Xoolihiisa si uu u daahirnoqdo.

الَّذِي يُوقَى مَالَهُ يَتَرَكَى ⑲

19. Ruux wax ugu nicmeeyayna oo abaalmarinna ma uusanjirin.

وَمَا لِأَحَدٍ عِنْدَهُ مِنْ نِعْمَةٍ تُجْرَى ⑳

20. Ee Wuxuu u bixin dar Eebaha sarreeya.

إِلَّا ابْتِغَاءَ وَجْهِ رَبِّهِ الْأَعْلَى ㉑

21. Wuuna raalli noqondoonaa Ruuxaasi.

وَأَسْوَفَ رِيحَى ㉒

Eebe wuxuu ku dhaartay in camalka Dadku kala duwanyahay, Ruuxii toosana Jidka wanaagsan loo fududayn, kii beeniya oo qalloocdana Jid xun uu qaadi, Aakhariyo Adduunna Eebaa iska leh, ee waa in laga digtoonaado xumaanta, wanaagga iyo dar Eebe wax u bixintana lugu dadaalo. Jaabir Bini Cabdiillaahi waxaa Laga wariyay inuu Yidhi: Rasuulkii Eebow ma waxaan u Camal-Falaynaa Amar la Dhammeeyay mise Amar Aannu Cosboonayn? Markaasuu Yidhi: «Amar la Dhammeeyay» markaasuu yidhi Suraaqo: Camalku maxaa weeye marka? Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe «ha yeelee» markaas wuxuu yidhi: «Ruuxii Camal-Faliba waxaa loo Fududayn camalkiisa». Waxaa wariyay Muslim. Al-Layl (1-21).

Suurat Ad-Duxaa

سُورَةُ الضُّحَى

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Barqinka. وَالضُّحَىٰ ﴿١﴾
2. Iyo Habeenku markuu xasilo (Madoobaado). وَاللَّيْلَ إِذَا سَجَىٰ ﴿٢﴾
3. Inaan Eebe kaa tagin Nabiyoow kuuna cadhoonin. مَا وَدَّعَكَ رَبُّكَ وَمَا قَلَىٰ ﴿٣﴾
4. Aakharana kaaga khayr badan Ad-duunka. وَلَلْآخِرَةُ خَيْرٌ لَّكَ مِنَ الْأُولَىٰ ﴿٤﴾
5. Eebaana ku siindoonna (wanaag) waadna raalli noqon. وَلَسَوْفَ يُعْطِيكَ رَبُّكَ فَتَرْضَىٰ ﴿٥﴾
6. Miyuusan ku helin Eebahaa Adigoo Agoon ah oosan ku dhawaynin. أَلَمْ يَجِدْكَ يَتِيمًا فَآوَىٰ ﴿٦﴾
7. Miyuunase ku helin Adigoo baadi ah oosan ku hanuuninin (kuu waxyooinin). وَوَجَدَكَ ضَالًّا فَهَدَىٰ ﴿٧﴾
8. Miyuunase ku helin Adigoo caydhi ah oosna ku hodminin. وَوَجَدَكَ عَائِلًا فَأَغْنَىٰ ﴿٨﴾
9. Ee Agoonta ha xoogin (hana dhibin). فَأَمَّا الْيَتِيمَ فَلَا تَقْهَرْ ﴿٩﴾
10. Ka wax su'aalina ha canaan. وَأَمَّا السَّائِلَ فَلَا تَنْهَرْ ﴿١٠﴾
11. Nicmada Eebahaana ka sheeke (ku mahadi). وَأَمَّا بِنِعْمَةِ رَبِّكَ فَحَدِّثْ ﴿١١﴾

Suuraddani waa Suurad wayn, sida suuradaha Quraanka ee kalaba, waxayna ku soo dagtay mar Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee) Xanuunsaday Gaaladuna dheheen Maxammad shaydaankiisii wuu ka tagay iyagoo ula jeeda Malaku-Jibriil oo waxyiga dib ula yar dhacay, Eebana wuxuu Suuradda ku sheegay nicmooyin uu Nabiga siiyay, iyo Agoonka inaan la dhibin, kuwa dhibaataysanna ee wax warsanna aan la canaan, Nicmada Eebana lagu mahadiyo. Rasuulkuna wuxu yidhi Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee: «Hodontinnimadu ma aha xoolo Badni, Laakin Hodontinnimadu waa Hodonnimada Nafta». Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Ad-Duxaa (1-11).

Suurat Ash-Sharx



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Miyaannaan kuu waasicinin Laabta (kuu nuurinin). أَلَمْ نَشْرَحْ لَكَ صَدْرَكَ ①
2. Oonnaan kaa dajinin culayskii. وَوَضَعْنَا عَنَّاكَ وَزْرَكَ ②
3. Dhabarka kaa cusleeyay. أَلَيْسَ الْأَفْقُصَ ظَهَرَكَ ③
4. Miyaannaan kor yeelin magacaaga (xudsiddaada). وَرَفَعْنَا لَكَ ذِكْرَكَ ④
5. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd (faraj). فَإِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ⑤
6. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd. إِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ⑥
7. Ee markaad Salaadda dhammayso isku dhib (Samo fal). فَإِذَا فَرَغْتَ فَانصَبْ ⑦
8. Eebana (khayr) ka rajee. وَأَلَىٰ رَبِّكَ فَارْجَبْ ⑧

Eebe wuxuu Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee) ku mannaystay wanaag badan, sida Laabta oo loo Nuuray, Culayska oo laga dajiyay, iyo Magaciisa oo la kor yeelay, wuxuuna Eebe sheegay in cidhiidhi kasta faraj ku dhawyahay, wuxuuna faray in ducada iyo khayrkana lagu dadaalo, Eebana wanaag laga rajeeyo.

Qataada waxaa laga wariyay in loo sheegay in Rasuulkii Eebe, «Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa ha yeelee» Asaxaabtiisii ugu bishaareeyay Aayaddan yidhina: «Hal cidhiidhi kama adkaado laba fudayd». Waxaa wariyay Ibnu Jariir. Ash-Sharx (1-8).

Suurat At-Tiin

سُورَةُ التِّينِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Tiinka iyo Zeytuunka. بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ
2. Iyo Duuri Siina. وَالتِّينِ وَالزَّيْتُونِ ①
3. Iyo Magaaladan Aaminka ah (Maka). وَطُورِ سِينِينَ ②
4. Ee waxaana ku abuuray Dadka Muuqaal toosan. وَهَذَا الْبَلَدِ الْأَمِينِ ③
- لَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنسَانَ فِي أَحْسَنِ تَقْوِيمٍ ④

5. Kaddibna waxaan u celinaynaa hoos (gabow dartiis).

ثُمَّ رَدَدْنَاهُ أَسْفَلَ سَافِلِينَ ﴿٥﴾

6. Hase yeeshee kuwa rumeeyey xaqa camalwanaagsanna falay, waxay mudan Ajri aan go'aynin.

إِلَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَلَهُمْ أَجْرٌ غَيْرُ مَمْنُونٍ ﴿٦﴾

7. Ee Maxaa Gaalada u sababay beeninta Qiyaamada intaas ka dib.

فَمَا يَكْذِبُكَ بَعْدَ الْبَلَدِينَ ﴿٧﴾

8. Miyuusan Eebe ahayn kan ugu xukun wanaagsan. (Eebaa xukun wanaagsan).

لَيْسَ اللَّهُ بِأَحْكَمَ الْحَاكِمِينَ ﴿٨﴾

Suuraddani waxay ka Warrami sida Eebe u Abuuray Dadka, una Wanaajiyey Abuurkiisa, hadana ugu Celin Gabow iyo Tabar yari Ciddi Cimrida, Eebana wuxuu ku Abaal marin kuwa Wanaagga Falay Wanaag iyo Ajiraan Dhamaanayn, Eebana waa kan Xukunkiisu Caadilka iyo Xaqa yahay uguna Fiicanyahay.

Abuu Hureere waxaa laga wariyey: Hadduu mid idinka mid ah Akhriyo Suuraddan iyo Dhamaadkeeda ha yiraahdo:

Waxaan ka mid ahay kuwa Marag Furi. At-Tiin (1-8).

Suurat Al-Calaq

سُورَةُ الْعَلَقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Wax ku akhri Nabiyouw Magaca Eebe ee abuuray (khalqiga).

اقْرَأْ بِاسْمِ رَبِّكَ الَّذِي خَلَقَ ﴿١﴾

2. Dadkana ka abuuray Calaq(*).

خَلَقَ الْإِنْسَانَ مِنْ عَلَقٍ ﴿٢﴾

3. Akhri Eebena waa kan Sharafta lehe.

اقْرَأْ وَرَبُّكَ الْأَكْبَرُ ﴿٣﴾

4. Ee Dadka baray sida Qalinka wax loogu qoro.

الَّذِي عَلَّمَ بِالْقَلَمِ ﴿٤﴾

5. Dadkana baray waxayna aqoonin.

عَلَّمَ الْإِنْسَانَ مَا لَمْ يَعْلَمْ ﴿٥﴾

6. Saas ma aha ee Dadku (Gaaladu) waa xadgudbeen.

كَلَّا إِنَّ الْإِنْسَانَ لِرَبِّهِ لَكَنَّاظٍ ﴿٦﴾

7. Markuu isku ogaaday Hodontinnimo.

أَنْ رَّاهُ اسْتَعْيَبَ ﴿٧﴾

8. Eebahaa xaggiisaase loo noqon.

إِنِّي إِلَىٰ رَبِّكَ الرَّجُوعِي ﴿٨﴾

9. Ka warrama midka ka reebaya.

أَرَأَيْتَ الَّذِي يَنْهَىٰ ﴿٩﴾

10. Addoon (Eebe) oo tukan Salaadda.

عَبْدًا إِذَا صَلَّىٰ ﴿١٠﴾

11. Bal ka warrama hadduu ka laga reebi hanuunsanyahay (waa Nabiga).

أَرَأَيْتَ إِنْ كَانَ عَلَىٰ الْهُدَىٰ ﴿١١﴾

12. Ama uu fari Eeba ka yaabid.

أَوْ أَمَرَ بِالتَّقْوَىٰ ﴿١٢﴾

13. Balse ka warrama hadduu midka wax ka reebi uu beeniyay (xaqa) kana jeedsaday (waa AbuuJahal iyo wixii la mid ahe).

أَرَأَيْتَ إِنْ كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ﴿١٣﴾

14. Miyuusan ogayn in Eebe arko.

أَلَمْ يَعْلَم بِأَنَّ اللَّهَ يَرَىٰ ﴿١٤﴾

15. Saas ma aha ee hadduusan joogin waxaannu qaban Foodda.

كَلَّا لَئِنْ لَمْ يَنْتَه لِنَسْفَعًا بِالنَّاصِيَةِ ﴿١٥﴾

16. Food beenaleey ah gafna badan.

نَاصِيَةٍ كَذِبَةٍ خَاطِئَةٍ ﴿١٦﴾

17. Ha u yeedho gargaarihiisa.

فَلْيَدْعُ نَادِيَهُ ﴿١٧﴾

18. Waxaannu u yeedhi Malaa'ig da-rane.

سَنَدْعُ الزَّبَانِيَةَ ﴿١٨﴾

19. Saas ma aha ee warkiisa ha maqlin Sujuudna una dhawow (Eebe).

كَلَّا لَا نُطِيعُ وَأَسْجُدُ وَاقْتَرِبُ ﴿١٩﴾

Suuraddani waa Suuraddii Quraanka u soo hor dagtay, waxayna ka billaabatay faridda wax barashada iyo Qalinka, taasoo ku tusin sida Diinta Islaamku ugu horrayso wax barashada iyo la dagaallanka Jahliga, waxaa kalooy ku tusin xumaanta isla waynida iyo Dadka oo xaqa laga reebo, iyo inaan la maqlin xummaanle warkiis ee Eebe lagu xidhnaado illeen isagaa xoog iyo awoodba leh.

Abuu-Hurayra waxa laga wariyay in Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» yidhi: «Addoonku wuxuu Eebihis ugu dhawyahay markuu sujuudsanyahay ee badiya Ducada. Waxaa wariyay Muslim. Al-Calaq (1-19).

(*) Wax yar oo ku dhaga darbiga riximka (dib u eegaha).

Suurat Al-Qadr

سُورَةُ الْقَدْرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Annagaa soo dajinnay Quraanka Habeenka Laylatul Qadarka ah (sharfafta leh).

إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ ﴿١﴾

2. Ma taqaannaa Laylatul Qadarka.

وَمَا أَذْرَبْكَ مَا لَيْلَةُ الْقَدْرِ ﴿٢﴾

3. Waa Habeen ka khayr badan Kun Billod (oo kale).

لَيْلَةُ الْقَدْرِ خَيْرٌ مِنْ أَلْفِ شَهْرٍ ﴿٣﴾

4. Waxaana soo daga Malla'igta (kale) iyo Malaku Jibriil habeenkaas idanka Eebe dartiis iyo amarkiisa.

تَنَزَّلُ الْمَلَائِكَةُ وَالرُّوحُ فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِمْ مِنْ كُلِّ أَمْرٍ ﴿٤﴾

5. Waana Habeen nabadgalyo inta waagu ka baryi.

سَلَّمَ هِيَ حَتَّى مَطَلَعِ الْفَجْرِ ﴿٥﴾

Wuxuu Eebe innoogu sheegay Suuraddan inuu Quraanka sharafta leh soo dajiyay Habeenkaa wanaagsan ee ka khayr badan kun bilood, waxaana la sheegay in Habeenkaasi ku jiro Bisha barakaysan ee Soon.

Saas daraadded mar hadduu yahay Habeen Sharaf leh Malaa'igtuna soo daga Habeen nabadgalyana yahay, wan in lagu dadaalaa sidii loo helilaha wanaagana la badiyo xumaantana la yareeyo.

Abuhurayra waxaa laga wariyay in Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» inuu yidhi: «Ruuxii Istaaga Laylatu-Qadarka «Salaad» Rumayn iyo ajri doonid darteed waa loo Dhaafaa wixii hormary oo dambigiisa ah» Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Al-Qadr (1-5).

Suurat Al-Bayyinah

سُورَةُ الْبَيِّنَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ma aha Kuwii Gaalobay ee ahaa ehlu kitaabka (Yahuud iyo Nasaara) iyo Gaaladii kuwo ka taga (xumaanta) intuu uga yimaaddo wax cad (xuja ah).

لَوْ كُنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ وَالْمُشْرِكِينَ مُنْفَكِينَ حَتَّى تَأْتِيَهُمُ الْبَيِّنَاتُ ﴿١﴾

2. Oo ah Rasuul Eebe oo akhriyi Kutub daahir ah.

رَسُولٍ مِنَ اللَّهِ يَتْلُو صُحُفًا مُطَهَّرَةً ﴿٢﴾

3. Oo xukun fiicani ku yaal.

فِيهَا كُتُبٌ قَيِّمَةٌ ﴿٣﴾

4. Mana kala tagin Gaalada ehlu Kitaabka ah intuu uga yimaaddo xaqa cad (xasad dartiis).

وَمَا تَفَرَّقَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ إِلَّا مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَتْهُمْ الْبَيِّنَاتُ ﴿٤﴾

5. Dadkana waxaan Eebe caabudidhiisa ahayn lama farin iyagoo u kali yeeli

وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ

Eebe Diinta, toosanna, Salaaddana oogi Zakadana bixin, Saasina waa diinta toosan.

حُفَّةً وَيُقِيمُوا الصَّلَاةَ وَيُؤْتُوا الزَّكَاةَ
وَذَلِكَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ﴿٥﴾

6. Kuwa Gaaloobay oo ehlu Kitaabka ah iyo Gaaladii waxay gali Naarta Jahannama ayna ku waari dhexdeeda, kuwaasina waa kuwa ugu sharbadan khalqiga.

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ وَالْمُشْرِكِينَ فِي
تَارِحَتِهِمْ خَلِيدِينَ فِيهَا أُولَئِكَ هُمْ شَرُّ الْبَرِيَّةِ ﴿٦﴾

7. Kuwa rumeeyayse xaqa Camalfiican-na falay kuwaasi waa kuwa ugu khayr badan khalqiga.

إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أُولَئِكَ
هُمْ خَيْرُ الْبَرِيَّةِ ﴿٧﴾

8. Abaalkooda ay Eebe agtiisa ku leeyihiin waa Jannooyin Nagaadi, dhexdeedana ay dureeri Wabiyaal ay kuna waari dhexdeeda waligood, Eebaa ka raalli noqday iyana way ka raali noqdeen, arrintaasna waxay u sugnaatay Ruuxii Eeba ka yaaba.

جَزَاءُ هُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ جَنَّاتٌ عَدْنٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا
الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ
ذَلِكَ لِمَنْ حَقَّقَى رَبَّهُ ﴿٨﴾

Suuraddu waxay Sheegi Xumaanta gaalada iyo inay Nabiga, Quraanka iyo xaqaba diidi xasad, kibir iyo xaq diidnimo, hase-yeeshee Diintu iyo wanaageeduba waa cadiyihiin sida Maalintoo kale, Dadkuna waa Laba, Mu'min khayr badan oo Janna gali, iyo Gaal shar badan iyo xumaan oo Naar gali (Eeba ha naga koriyee).

Nabiguna wuxuu yidhi «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yelee» «Yahuudi waxay u kala Tagtay kow iyo Toddobaatan Qaybood, nasaarana waxay u kala Tageen laba iyo Toddobaatan qaybood, ummaddanna waxay u kala tagi saddex iyo Toddobaatan qaybood, Dhammaanna naartay gali mid mooyeene» Waxay dheheen: Waa tee Rasuulkii Eebow? Wuxuu Yidhi: «Waa tan ku socota saan Nahay ani iyo Asxaabtayda». Al-Bayyinah (1-8).

Suurat Az-Zalzalah



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Maka Dhulka la gilgilo.

إِنَّا زَلَّلْنَا الْأَرْضَ زَلْزَالَةً

2. Dhulkuna soo bixiyo culayskiisii (wixii ku aasnaa).

وَأَخْرَجْنَا الْأَرْضَ أَتْقَانًا

3. Dadkuna (Gaaladuna) dhahaan ma-xay leedahay.

وَقَالَ الْإِنْسَانُ مَا لَهَا ۝٣

4. Maalintaas waxay ka sheekayn war-keeda.

يَوْمَئِذٍ تُحَدِّثُ أَخْبَارَهَا ۝٤

5. Maxaayeelay Eebaa u waxyooday.

يَا نَرْبِّكَ أَوْحَىٰ لَهَا ۝٥

6. Maalintaas Dadku way soo bixi iyagoo kala tagsan (xagga Diinta iyo Camalkaba) si ay u arkaaan camalkoo-da.

يَوْمَئِذٍ يَصُدُّرُ النَّاسَ أَسْتَأْتُوا لِعَمَلِهِمْ ۝٦

7. Ruuxiise wax yaroo khayra fala wuu arki.

فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَهُ ۝٧

8. Kiise wax yar oo shar ah fala wuu arki.

وَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ شَرًّا يَرَهُ ۝٨

Qiyaamadu waa xaq sagan si Ruux walba looga abaal mariyo Camalkiisa, khayr Ruuxii fala wuu la kulmi, xumaan yar Ruuxii sameeyana wuu arki, Ruux walbana suu ka Diin yeesho yaa lugu abaal marin. Abuu-Hurayra waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulkii Eebe «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» yaa akhriyay Aayaddan: (Maalintaas waxay ka sheekayn warkeeda) Wuxuuna yidhi: «Ma ogtihiin warkeeda?» waxay dheheen Eebe iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yidhi: «Warkeedu waa inay ku marag kacdo Addoon kastaba wuxuu ku camal falay kor-keeda, iyadoo dhihi: wuxuu camal falay sidaa iyo sidaa, Maalin hebla iyo Maalin hebla, warkeedu wakaas». Waxaa wariyay Axmad iyo Tirmidi iyo Nasaai: Az-Zalzalah (1-8).

Suurat Al-Caadiyaat



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Fardaha Jihaadka u orda iyagoo qaylyi.

وَالْعَادِيَاتِ ضَبْحًا ۝١

2. Iyo kuwa dadka Qoobkooda ku ifiya (guuraha).

فَالْمُورِيَاتِ قَدْحًا ۝٢

3. Iyo kuwa Cadawga weerara Subax-dii.

فَالْمَغِيرَاتِ مِجْرَابًا ۝٣

4. Ee Boodhka kiciya.

فَأَثَرُنَّ بِوَدْقِهَا ۝٤

5. Cadawgana dhexgala. فَوَسَطْنَ بِهِ جَمْعًا ٥
6. Ee Dadku Eebohood waa diideen. إِنَّ الْإِنْسَانَ لِرَبِّهِ لَكُودٌ ٦
7. Arrintaasna Dadku wuu ogyahay. وَلَا تَعْلَمُ عَلَىٰ ذَٰلِكَ أَشْهُدٌ ٧
8. Dadkuna Xoola jacdaylka waa ku daranyahay. وَلَا تَعْلَمُ لِحُبِّ الْخَيْرِ لَشَدِيدٌ ٨
9. Miyuuna ogayn Marka Xabaalaha waxa ku jira la soo bixiyo. * أَفَلَا يَعْلَمُ إِذَا بُعِثَ رَمَىٰ الْأُقْبُورِ ٩
10. Laabaha waxa ku qarsoonna la muujiyo. وَحُضِّلَ مَا فِي الصُّدُورِ ١٠
11. In Eebohood Maalintaas ogyahay. إِنَّ زَهْرَ رِيحِهِمْ يَوْمَ ذَٰلِكَ حَبِيرٌ ١١

Jihaadka Gaaladu waa Arrin wayn oo waajib ah, kaasoo ah in loo darbado wax kasta oo qalab ah, qiimaha arrintaasna waxaa ku tusin in Eebe ku dhaartay. waxaa kale oy Suuraddu ina tusin Madax adaygga Dadka iyo Xoola jacaylkiisa, marse haddii Qiyaame la iman, Qalbiga wixii ku qarsoonaana la muujin Eebana wax walba ogyahay, soo in loo darbado khayrkana la badiyo ma haboona. Al-Caadiyaat (1-11).

Suurat Al-Qaaricah



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Qaaricada (qalbiga garaacda). الْقَارِعَةُ ١
2. Qaarica maxay tahay. مَا الْقَارِعَةُ ٢
3. Mase taqaannaa Qaarico. وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْقَارِعَةُ ٣
4. Waa Maalinta Dadku noqon sida Baalallay. يَوْمَ يَكُونُ النَّاسُ كَالْفَرَاشِ الْمَبْثُورِ ٤
5. Buuruhuna ay noqon sida Suuf kala firdhay. وَتَكُونُ الْجِبَالُ كَالْعِهْنِ الْمَنْفُوشِ ٥
6. Ruuxiise miisaankiisa (fiican) cuslaado. فَأَمَّا مَنْ نَقَلَ مَوَازِينَهُ ٦
7. Wuxuu ku noolaan nolol raalli ah. فَهُوَ فِي عِيشَةٍ رَاضِيَةٍ ٧

8. Ruuxiise uu fududaado Miisaankiisa (fiican).

وَأَمَّا مَنْ حَقَّ قَوْلُ رَبِّهِ ۝٨

9. Wuxuu u hoydaa (Naarta) Haawiya.

فَأَمَّهُ هَوَايَ ۝٩

10. Ma taqaannaa Haawiya.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا هِيَ ۝١٠

11. Waa Naar kulayl daran.

نَارِ حَامِيَةٍ ۝١١

Maalinta Qiyaame Magacya badan bay leedahay, waxayna ku tusin waynideeda siduu yidhi Cali Binu Abii Daalib: Magacyada badan waxay ku tusin waynida ka leh. waana Maalin Miisaan Caddaalad la taagi, Ruux walbana uu la kulmi wuxuu hormarsaday, oo ah abaal-marin Janno wanaagsan, ama Naar kulayl badan.

Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Naartiibaa u dacwootay Eebeheed iyadoo leh: Eebow qaarkaybaa qaar cunay, markaasuu u idmay Laba neefsasho, mid qabowga ah iyo mid kulaylka ah, waana Qabowga u daran eed heshaan xagaagii, iyo kulaylka u daran eed heshaan Jiilaalkii». waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Al-Qaaricah (1-11).

Suurat At-Takaathur

سُورَةُ التَّكَاثُرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa idin shuqliyay Dadow wax badsasho (iyo isu faanid).

أَلَمْ نَكْمِ الْأَعْكَاثُ ۝١

2. Intaad Xabaalaha ka tagtaan (dhi-mataan).

حَتَّى زُرْتُمُ الْمَقَابِرَ ۝٢

3. Saas ma aha ee waad ogaandoontaan.

كَلَّا سَوْفَ تَعْلَمُونَ ۝٣

4. Haddana saas ma ehee waad ogaandoontaan (Faanka cidhibtiisa).

كَلَّا كَلَّا سَوْفَ تَعْلَمُونَ ۝٤

5. Haddaad dhab ahaan wax u ogtihiin (waad dayn lahaydeen xumaanta).

كَلَّا لَوْ تَعْلَمُونَ عِلْمَ الْيَقِينِ ۝٥

6. Dhab ahaan baad u arkaysaan (Naarta) Jaxiima.

لَتَرَوُنَّ الْجَحِيمَ ۝٦

7. Ka dibna waxaad u arkaysaan Naartaas si yaqiin ah.

كَلَّا لَتَرَوُنَّهَا عَيْنَ الْيَقِينِ ۝٧

8. Waxaana laydin warsan Maalintaas Nicmadii.

كَلَّا لَنَسْفَعُنَّ يَوْمَئِذٍ عَنِ النَّعِيمِ ۝٨

Faan iyo isla wayni wax qiima ah ma leh, waxaana lagala kulmaa cidhibxumo iyo khasaare, marse hadii la dhiman dhab-ahaanna wax loo arki doono, Nicmadii Addunyana lays waydiindoono waa in wanaag la hormarsadaa, Xoolo iyo Dad isugu faanna laga tagaa, Xooluhu maxay tari haddaan wanaag loo hormarsanin.

Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee»: Maydka waxaa raaca saddex, laba way soonoqon midna wuu la jiraa: Waxaa raaci Ehelkiisa, maalkiisa iyo camalkiisa, waxaa soo noqon Ehelkiisii iyo maalkiisii, waxaana ku hadhi camalkiisii. Waxaa wariyay Bukhaari, Muslim iyo Tirmid. At-Takaathur (1-8).

Suurat Al-Casr

سورة العصر

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Waqtiga Casarka'ah.

وَالْعَصْرِ ۝١

2. In Dadku khasaaro ku suganyahay.

إِنَّ الْإِنْسَانَ لِرَبِّهِ ۝٢

3. Marka laga reebo kuwa rumeeyay xaqa ee Camal fiican fal, isuna dardaarma xaqa, isuna dardaarma Samirka.

إِلَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَتَوَّصُوا ۝٣
بِالْحَقِّ وَتَوَّصُوا بِالصَّبْرِ ۝٤

Suuraddani waa Suurad gaaban, haseyeeshee aad u wayn, waxayna caddaysay in Dadku khasaaray wixii ka soo hadhay kuwa xaqa rumeeyay camal wanaagsanna la yimid, wanaaggana is faray, Samirkana isu dardaarmay.

Dabaraani wuxuu ka wariyay Cubaydullaahi Binu Xafse inuu yidhi: Laba ruux oo asxaabtii rasuulka ka mid ah waxay ahaayeen hadday kulmaan inayn kala tagin isagoon midkood ahkhiyriin suuraddan ilaa dhammadkeeda markaasay isa salaami jireen.

Imaamu Shaaficina wuxuu Yidhi Eeba ha ka raali noqdee: Dadku Hadday Suuraddan Fiiriyaan way u waasac noqon lahayd (ku fillaan lahayd). Al-Casr (1-3).

Suurat Al-Humazah

سورة الحمزة

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Halaag Wuxuu u Sugnaaday xanle wax ceebeeya oo Dhan.

وَيَذُلُّكُمْ أُنْجِلْ هَمْزٌ لَمْ يَمْزُ ۝١

2. Oo Xoolaha kulmiya (xaqana ku bixinin). الَّذِي جَمَعَ مَالًا وَعَدَّدَهُ ①
3. Ma wuxuu u malayn in xoolihiisu waarin. يَحْسَبُ أَنَّ مَالَهُ أَخْلَدَهُ ②
4. Saas ma aha ee waxaa lagu tuuri (Naarta) Xudama. كَلَّا لَيُنْبَذَنَّ فِي الْحُطَمَةِ ③
5. Ma taqaannaa Xudama. وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْحُطَمَةُ ④
6. Waa Naarta Eebe ee la huriyay. نَارَ اللَّهِ الْمَوْجُودَةَ ⑤
7. Gubaysana Quluubta (Kulayl dar-tiis). الَّتِي تَطَّلِعُ عَلَى الْأَفْئِدَةِ ⑥
8. Waana lagu dabooli Naartaas Gaa-lada. إِنهَا عَلَيْهِمْ مُّوَصَّدَةٌ ⑦
9. Tiirar la fidiyay yayna ahaan dhex-deeda. فِي عَمَدٍ مُمَدَّدَةٍ ⑧

Xanta, Dadkoo la xaqiro oo la yaso, Xoolahoo la kulmiyo oon xaqa lagu bixinin waa arrimo xun Ruuxii ku kacana sabab ugu noqota Naar galiddeed, saa daraaddeed waa in layska jiraa xumaanaha la soo sheegay, illeen xan wax kuuma qabato, Xoolana kuma waariyaan. Al-Humazah (1-9).

Suurat Al-Fiil

سُورَةُ الْفِيلِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ma Ogtahay sida Eeba ku falay asaxaabtii Maroodiga «Colkii». الَّذِي تَرَكَيْفَ فَعَلَ رَبُّكَ بِأَصْحَابِ الْفِيلِ ①
2. Miyaan Eebe ka yeelin dhagartoodii wax dhumay. الَّذِي جَعَلَ كَعِيدُهُمْ فِي تَضَلُّلٍ ②
3. Oosan ku dirin korkooda Shimbiro kooxa ah. وَأَرْسَلَ عَلَيْهِمْ طَيْرًا أَبَابِيلَ ③
4. Kuna tuuraysa Dhagaxyo la kulleeyay. تَرْمِيهِمْ بِحِجَارَةٍ مِّن سِجِّيلٍ ④

5. Markaas Eebe ka yeelay Bal la daaqay sidiis.

﴿قَمَاهُمْ كَصَفِّ مَأْكُولٍ﴾

Suuraddani waxay ka warrami Arrin dhacday Nabiga dhalashaddiisii wax yar ka hor, (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) oo ah in Gaal Xabashi ah Yaman ka soo duulay si uu u soo dumiyo kacbada Sharafta leh, markuu Maka ku soo dhawyahayna Eebe ku sii daayay Shimbir Dhaqaxyo ku tuuri Colkiina saa ku jabay, kacbadiina nabadgashay. Arrintaasu la yaab ma leh, Maxaa yelay Eebe isagaa awood leh, immisayse dhacday wax shimbir ka yar intay wax halaageen. Al-Fiil (1-5).

Suurat Quraysh

سُورَةُ الْقُرَيْشِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Caadaysigii Qureesheed.

﴿لِإِيلَافِ قُرَيْشٍ﴾

2. Ay ka caadayeeshen Safarka Xaagaaga iyo Jiilaalka darteed.

﴿إِلَيْفِهِمْ رِحْلَةَ الشِّتَاءِ وَالصَّيْفِ﴾

3. Ha u caabudeen Eebeha Beydkan (Kacbada).

﴿فَلْيَعْبُدُوا رَبَّ هَذَا الْبَيْتِ﴾

4. Eebahii ka quudiyay gaajo, kana aamingaliyay cabsi.

﴿الَّذِي أَطْعَمَهُمْ مِنْ جُوعٍ وَإِئْتَمَهُمْ مِنْ خَوْفٍ﴾

Eebe isagaa abuuray Dadka isagaana quudiya, halkanna wuxuu ku mannaystay oo xusuusiyay Qurayshii Reer Makaad siduu Eebe ugu nicmeeyay, taasoo ah inuu kulmiyay, baahina ka quudiyay, cabsina ka nabadgaliyay, si ay Eebe ugu mahad-naqaanna ay waajibtahay inay caabudaan, Ruuxii Eebe u nicmeeyana Shukrigeedaa ku waajib ah.

Rasuulkii Eebana «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee» wuxuu akhriyay Suuraddan markaasuu yidhi: magaciin Ba'qureysheey caabuda Eebaha Beydkan idinka quudiyay gaajo idinkana aamin yeelay cabsi. Quraysh (1-4).

Suurat Al-Maacuun

سُورَةُ الْمُاعُونِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ka warrama kan beenin Abaalmarinta (Qiyaamada).
2. Kaas xooga Agoonta (xaqeeda).
3. Aan kuna boorrinaynin quudinta miskiinka.
4. Waxaa halaag u sugnaaday kuwa tukan (waa Munaafiqiinta).
5. Ee haddana halmaansan Salaaddooda.
6. Dadkana is tusiya.
7. Una diida alaabta (Laysugu kaal-meeyol).

أَرْءَيْتَ الَّذِي يُكَذِّبُ بِالذِّينِ ﴿١﴾

فَذَلِكَ الَّذِي يَدْعُ الْيَتِيمَ ﴿٢﴾

وَلَا يَحْضُ عَلَىٰ طَعَامِ الْمَسْكِينِ ﴿٣﴾

فَوَيْلٌ لِلْمُصَلِّينَ ﴿٤﴾

الَّذِينَ هُمْ عَنْ صَلَاتِهِمْ سَاهُونَ ﴿٥﴾

الَّذِينَ هُمْ بِرَأْيِهِمْ وَن ﴿٦﴾

وَيَمْتَعُونَ الْمَاعُونَ ﴿٧﴾

Abaalmarinta oo la beeniyo, Agoontoo la dhibo, Masaakiintoon wax lagu sadaqaaysanin, Salaaddoo layska hilmaamo, Dadkoo laystustusiyo iyo weelasha iyo kaalmadoo la ceshado waa arrimo xun xun oyna wanaagsanayn in loo dhawaado.

Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelec: «Ruuxii dadka maqashiiya» camalkiisa Eebana wuxuu maqashiiyaa khalqigiisa wuuna xaqiraa wuuna yareeyaa» Waxaa wariyay Imaam Axmad. Al-Maacuun (1-7).

Suurat Al-Kawthar

سُورَةُ الْكَوْثَرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Annagaa ku siinnay Nabiyow Waadi Janno (iyo khayr badan).

إِنَّا أَنْعَمْنَا عَلَىٰكَ الْكَوْثَرَ ﴿١﴾

2. Ee u tuko Eebahaa dartiis, waxna u gawrac.

فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَأَنْحَرِ ﴿٢﴾

3. Ruuxii ku necebna waa mid cidhib beelay.

إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ الْأَبْتَرُ ﴿٣﴾

Eebe wuxuu ugu nicmeeyay Nabigiisa Muxammad ah «Naxariis iyo nahadgalyo korkiisa Eebe ha yeelec» Waadi Janno, wuxuuna Faray in shukri dartiis uu u tukado Salaaddana Daa'imo, waxna gawrac, wuxuuna u sheegay in Ruuxii la collooba uu Cidhib-beeli.

Ibnu-Cumar wuxuu yidhi: waxaa Eebe Nabiga siiyay Wabi ku yaal Jannada oo Labadiisa dhinac Dahab

iyoo Fiddo yihiin, oo Jowhar daadin, Biyihisuna ka cadyihiin Caano, kana macaanyihiin Malab. Waxaa wariyay Tirmidi. Al-Kawthar (1-3).

Suurat Al-Kaafiruun

سُورَةُ الْكَافِرُونَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa, Gaalooy.
2. Ma caabudayo waxaad caabudaysaan.
3. Idinna ma caabudaysaan Eebahaan caabudi.
4. Mana caabudin waxaad caabuddeen.
5. Idinkuna (hadda) ma caabudaysaan Eebahaan caabudi.
6. Idinkana Diintiinna yaad leedihiin, Anna Diintaydaan leeyahay.

قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ ١

لَا أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ ٢

وَلَا أَنشُرْ عَلَيْكُمْ مَا عَابَدْتُمْ ٣

وَلَا أَنَا عَابِدٌ مَّا عَبَدْتُمْ ٤

وَلَا أَنشُرْ عَلَيْكُمْ مَا عَابَدْتُمْ ٥

لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ ٦

Suuraddani waxay soo dagtay markii Gaaladii Quraysheed ay Nabiga waydiisteen inuu Ilaahyadooda (Sanamyadooda) Sano caabudo, iyana Ilaahiisa ay Sano caabudaan, markaasaa Eebe soo dajiyay Suuraddan, maxaa yeelay Ilaahay wax ka soo hadhay oo la caabudo ama laga Eeba yeesho ma aha isku soo dhawaansho, ee waxaa isku soo dhawaansha ah xumaantoo laga tago, iyo wanaaggo la raaco, waxayna ku tusin Suuraddu inaan Ruuxna Qasab lagu islaaminin.

Rasuulkii Eebana wuxuu ahaa «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» martkuu seexanayo kii akhriya Suuraddan ilaa uu ka dhammeeyo. Waxaa wariyay Dabaraani. Al-Kaafiruun (1-6).

Suurat An-Nasr

سُورَةُ النَّاسِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Markuu yimaaddo gargaarkii Eebe iyo Fatxiga (Furashada maka).

إِدْجَاةَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحِ ①

2. Ood aragtid Dadkoo Diinta Eebe u soo gali Kooxo.

وَرَأَيْتَ النَّاسَ يَدْخُلُونَ فِي دِينِ اللَّهِ أَفْوَاجًا ②

3. U tasbiixso Eebe adoo ku mahadin Dambidhaafna waydiiso illeen waa dambidhaaf badanee.

فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَأَسْتَغْفِرْهُ إِنَّهُ كَانَ تَوَّابًا ③

Suuraddani waxay soo dagtay Ayaamihii u dambeeyay ee noloshii Nabiga Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee, isagoo Eebe fari in Marka Magaalada barakaysan ee Maka la soo celiyo Dadkuna Islaannimada koox koox u galaan inuu Nabigu cibaadada Eebe badiyo kana toobad dalbo. Waxayna ku tusin Suuraddu Nicmadoo lagu shukriyo, iyo in Eebe Diintiisa u Gargaari, waxaa kaloy ku Tusisay Ajashii Nabiga Ammaan iyo naxariis korkiisa Eebe ha yeelee.

Nin Daris u ahaa Jaabir Bini Cabdillaahi yaa wuxuu yidhi: Waxaan ka soo galay Safar markaasuu ii yimid Jaabir bini Cabdillaahi ina Salaamay, Markaasaan uga sheekeeyay suu Dadku u kala tagay iyo waxay la yimaadeen Markaasuu Jaabir ooyay, isagoo leh: Waxaan Rasuulkii Eebe ka maqlay Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa ha yeelee isagoo leh (dadku waxay ku galeen diinta Eebe kooxo, waxayna uga bixi doonaan kooxo). Waxaa wariyay Imaam Axmad. An-Naşr (1-3).

Suurat Al-Masad

سُورَةُ الْمَسَدِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa khasaaray Gacmihii Abuulahab, halaagmayna.

نَبَتْ يَدَا أَبِي لَهَبٍ وَتَبَّ ①

2. Waxna uma tarin Xoolihiisii iyo wuxuu kasbadayna.

مَا أَغْنَىٰ عَنْهُ مَالُهُ، وَمَا كَسَبَ ②

3. Wuxuuna gali Naar Olal leh.

سَيَصْلَىٰ نَارًا ذَاتَ لَهَبٍ ③

4. Haweenaydiisii Qoryaha xambaari jirtayna (waxay gali Naar).

وَأَمْرَأَتُهُ، حَمَّالَةَ الْحَطَبِ ④

5. Luqunteedana waxaa la yeeli Xadhig Liif ah.

فِي جِيدِهَا حَبْلٌ مِّن مَّسَدٍ ⑤

Suuraddani waxay soo dagtay nabigu Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee mar uu koray goor Subax ah Buurta Safa Dadkana u yeedhay kuna yidhi: haddaan col idin soo weerari idiin sheego ma i rumaysanaysaan, markaasay dheheen waannu ku rumaysan runna waannu kugu naqaannaa, markaasuu yidhi: Haddaba waxaan idiinka digi caddibaadda Eebe, Abuu lahabbaa markaa yidhi:

Khasaare ha kugu dhecee ma waxaasaad noogu yeedhay?. waxayna ku tusin Suuraddu inaan Qaraabannimo iyo Xoolo, iyo carruur midna wax taraynin hadduu ruux dhumo xaqana ka leexdo, sida Abii-lahab iyo haweenaydiisii xumaanta ku taageertay. Al-Masad (1-5).

Suurat Al-Ikhlaas



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) Eebe waa Kali (wehelna ma leh).
2. Waana Sayid (deeqtoon).
3. Eebe wax ma dhalin, isna lama dhalin.
4. Wax la mid ahna ma jiro.

قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ ١

اللَّهُ الصَّمَدُ ٢

لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ ٣

وَلَمْ يَكُنْ لَهُ كُفُوًا أَحَدٌ ٤

Suuraddani waa Suurad gaaban, hasa yeeshee waa Suurad aad iyo aad u wayn, waxayna soo dagtay markay Gaaladii Qureesheed Nabiga ku dheheen Eebahaaga noo tilmaan, wuxuuna Eebeheen ku caddeeyay Suuraddan inuu Kali yahay, Maxaa yeelay? wehel uma baahna, inuu Sayid kaaftoonyahay Dadkuna u baahanyihiin, inuusan wax dhalin siday Gaalada qaarkood sheegtay, Wax la mid ahna uusan Jirin.

Bukhaari wuxuu wariyey inaan Eebbe Cidna uga adkaysin badnayn dhibuu maqlay, ilmay u sheegeen isna wuu arsuqaa oo caafiyaa.

Hadaikii Eebe ee Qudsiga ahaa waxaa ku sugnaaday: Ibnu aadam wuu i beeniyeey kumana haboona, wuuna i caayey kumana haboona, beenintiisu waa inuu yidhi iima soo celiyu siduu igu billaabay, bilawguna iigama fududa soo celinta, caydiisuna waa inuu yidhi: Eebe ilmuu yeeshay, anna waxaan ahay keli Sayid ah, mana dhalin laymana dhalin wax ila mid ahna ma jiro.

Waxaa wariyey Bukhaari. Al-Ikhlaas (1-4).

Suurat Al-Falaq



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) waxaan

قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ ١

ka magangalay Eebeha Subaxa (abuuray).

2. Wixii shar leh sharkiisa.

مِنْ شَرِّ مَا خَلَقَ ٢

3. Iyo Habeenka sharkiisa markuu madoobaado.

وَمِنْ شَرِّ غَاسِقٍ إِذَا وَقَبَ ٣

4. Iyo sharka Sixirrowga wax ku tufa guntimaha.

وَمِنْ شَرِّ النَّفَّاثَاتِ فِي الْعُقَدِ ٤

5. Iyo sharka Xaasidka wax Xasda.

وَمِنْ شَرِّ حَاسِدٍ إِذَا حَسَدَ ٥

Suuraddani waxay Caddayn ku Xidhnaanta Eebe iyo ka magangalkiisa wixii wax dhiba sida Sixirka, Xaasidka iyo wax kastoo xun.

Caa'isha waxaa laga wariyey in Rassulkii Eebe (Naxariis iyo Nabad gelyo korkiisa Eebbe ha yeelee) markuu xanuunsado uu isku akhriin jiray Mucawadataynka (Labada magangelyo) iskuna tufi jiray, markuu xanuunku ku darraadayna aan ku akhriin jiray magangalyooyinka Gacantiisana jidhkiisa ku masixi jiray Barako darteed.

Waxaa sheegay Bukhaari, Imaamu maalik, Abu Daa'uud iyo Nasaa'i. Al-Falaq (1-5).

Suurat An-Naas



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa «Nabiyow» waaxaan ka magangeley Eebaha dadka barbaariya.

قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ ١

2. Ee dadka xukuma.

مَلِكِ النَّاسِ ٢

3. Ee ah Ilaaha dadka.

إِلَهِ النَّاسِ ٣

4. Sharka «iyo xumaanta» waswaasiyaha qarsoon.

مِنْ شَرِّ الْوَسْوَاسِ الْخَنَّاسِ ٤

5. Ee waswaasiya laabta «Qalbiga» dadka.

الَّذِي يُوسْوِسُ فِي صُدُورِ النَّاسِ ٥

6. «Kuwaas wax waswaasinaya» oo ah jinni iyo insiba.

مِنَ الْجِنَّةِ وَالنَّاسِ ٦

Sidaa oo kale waxay suuraddan sheegi in Eebaha awoodda leh laga magan galo xumaanta iyo sharka kuwa wax dhibay waxna waswaasinaya, xumaanloowgana ah, ama jinni ha ahaadeen ama insi ha ahaadeene. Waxaa dhab ah in had iyo jeer ay jiraan dhibayaal warxumatahiila, dadka ka qasa diintiisa, aakharadiisa, iyo noloshiisaba. Hadaba waa in kuwaas Eebbe laga hoos galaa, lagana digtoonaadaa. Abu darri waxa laga wariyay inuu yidhi: «Waxaan u imid Rasuulkii Eebe «Naxariis iyo nabad gelyo korrkiiisa Eebbe ha yeelee» oo masjidka jooga markaasaan fariistay wuxuuna yidhi» Abu dar ma tukatay? waxaan idhi maya, wuxuu yidhi istaag oo tuko, wuxuu yidhi waan istaagay oo waan tukaday, waana fariistay, markaasuu yidhi». Abudar ka magan gal Eebe sharka shayaadiinta insiga iyo jinniga. Markaasuu yidhi waxaan idhi: Rasuulki Eebow Insigu ma shayaadiin buu leeyahay? markaasuu yidhi: «Haa». waxaa wariyay Imaam Axmad iyo Ibnu Maajah. An-Naas (1-6).



فَهْرَسْتَانُ بِأَسْمَاءِ السُّورِ وَبَيَانِ الْبَيَانِ فِيهَا

السُّورَة	رَقْمَهَا	الصَّفْحَة	الْبَيَان	السُّورَة	رَقْمَهَا	الصَّفْحَة	الْبَيَان
الفَاتِحَة	١	٣	مَكِّيَة	العنكبوت	٢٩	٥٦٩	مَكِّيَة
البَقَرَة	٢	٤	مَدِّيَة	الرُّوم	٣٠	٥٨٠	مَكِّيَة
آل عَمْرَان	٣	٦٤	مَدِّيَة	لُقْمَان	٣١	٥٨٩	مَكِّيَة
النِّسَاء	٤	١٠١	مَدِّيَة	السَّجْدَة	٣٢	٥٩٥	مَكِّيَة
المَائِدَة	٥	١٣٧	مَدِّيَة	الأَحْزَاب	٣٣	٦٠٠	مَدِّيَة
الْأَنْعَام	٦	١٦٧	مَكِّيَة	سَبَأ	٣٤	٦١٤	مَكِّيَة
الأَعْرَاف	٧	٢٠٠	مَكِّيَة	فَاطِر	٣٥	٦٢٤	مَكِّيَة
الْأَنْفَال	٨	٢٣٧	مَدِّيَة	يَس	٣٦	٦٣٢	مَكِّيَة
التَّوْبَة	٩	٢٥١	مَدِّيَة	الصَّافَات	٣٧	٦٤١	مَكِّيَة
يُونُس	١٠	٢٧٨	مَكِّيَة	ص	٣٨	٦٥٦	مَكِّيَة
هُود	١١	٢٩٨	مَكِّيَة	الرُّمَر	٣٩	٦٦٦	مَكِّيَة
يُوسُف	١٢	٣١٩	مَكِّيَة	عَافِر	٤٠	٦٧٩	مَكِّيَة
الرَّعْد	١٣	٣٣٩	مَدِّيَة	فُصِّلَتْ	٤١	٦٩٢	مَكِّيَة
إِبْرَاهِيم	١٤	٣٤٩	مَكِّيَة	الشُّورَى	٤٢	٧٠١	مَكِّيَة
الحِجْر	١٥	٣٥٩	مَكِّيَة	الرُّخْف	٤٣	٧١٠	مَكِّيَة
التَّحَل	١٦	٣٦٩	مَكِّيَة	الدَّخَان	٤٤	٧٢١	مَكِّيَة
الإِسْرَاء	١٧	٣٩٠	مَكِّيَة	الجَاثِيَة	٤٥	٧٢٦	مَكِّيَة
الكَهْف	١٨	٤٠٩	مَكِّيَة	الأَحْقَاف	٤٦	٧٣٢	مَكِّيَة
مَرْيَم	١٩	٤٢٧	مَكِّيَة	مُحَمَّد	٤٧	٧٣٩	مَدِّيَة
طه	٢٠	٤٣٨	مَكِّيَة	الفَتْح	٤٨	٧٤٥	مَدِّيَة
الْأَنْبِيَاء	٢١	٤٥٣	مَكِّيَة	الحُجْرَات	٤٩	٧٥١	مَدِّيَة
الحَج	٢٢	٤٦٧	مَدِّيَة	ق	٥٠	٧٥٥	مَكِّيَة
المُؤْمِنُون	٢٣	٤٨١	مَكِّيَة	الذَّارِيَات	٥١	٧٦٠	مَكِّيَة
السُّور	٢٤	٤٩٤	مَدِّيَة	الطُّور	٥٢	٧٦٦	مَكِّيَة
الْفُرْقَان	٢٥	٥٠٩	مَكِّيَة	النَّجْم	٥٣	٧٧١	مَكِّيَة
الشُّعْرَاء	٢٦	٥٢٠	مَكِّيَة	القَمَر	٥٤	٧٧٧	مَكِّيَة
النَّمَل	٢٧	٥٣٩	مَكِّيَة	الرَّحْمَن	٥٥	٧٨٣	مَدِّيَة
القَصص	٢٨	٥٥٣	مَكِّيَة	الْوَاقِعَة	٥٦	٧٨٩	مَكِّيَة

فَهْرَسْتٌ بِأَسْمَاءِ السُّورِ وَبَيَانَ الْبُكْرِ وَالْمَدَائِرِ مِنْهَا

السُّورَة	رَقْمُهَا	الصَّفْحَة	البَيَان	السُّورَة	رَقْمُهَا	الصَّفْحَة	البَيَان
الحديد	٥٧	٧٩٦	مَدِينَة	الطارق	٨٦	٨٩٣	مَكِّيَة
المجادلة	٥٨	٨٠٣	مَدِينَة	الأعلى	٨٧	٨٩٥	مَكِّيَة
الحشر	٥٩	٨٠٨	مَدِينَة	الغاشية	٨٨	٨٩٦	مَكِّيَة
الممتحنة	٦٠	٨١٣	مَدِينَة	الفجر	٨٩	٨٩٨	مَكِّيَة
الصف	٦١	٨١٧	مَدِينَة	البلد	٩٠	٩٠٠	مَكِّيَة
الجمعة	٦٢	٨٢٠	مَدِينَة	الشمس	٩١	٩٠٢	مَكِّيَة
المنافقون	٦٣	٨٢٣	مَدِينَة	الليل	٩٢	٩٠٣	مَكِّيَة
التغابن	٦٤	٨٢٥	مَدِينَة	الضحى	٩٣	٩٠٥	مَكِّيَة
الطلاق	٦٥	٨٢٨	مَدِينَة	الشح	٩٤	٩٠٦	مَكِّيَة
التحريم	٦٦	٨٣١	مَدِينَة	التين	٩٥	٩٠٦	مَكِّيَة
الملك	٦٧	٨٣٤	مَكِّيَة	العلق	٩٦	٩٠٧	مَكِّيَة
القلم	٦٨	٨٣٨	مَكِّيَة	القدر	٩٧	٩٠٩	مَكِّيَة
الحاقة	٦٩	٨٤٣	مَكِّيَة	البينة	٩٨	٩٠٩	مَدِينَة
المعارج	٧٠	٨٤٧	مَكِّيَة	الزلزلة	٩٩	٩١٠	مَدِينَة
نوح	٧١	٨٥١	مَكِّيَة	العاديات	١٠٠	٩١١	مَكِّيَة
الجن	٧٢	٨٥٤	مَكِّيَة	القارعة	١٠١	٩١٢	مَكِّيَة
الزمر	٧٣	٨٥٨	مَكِّيَة	النكاثر	١٠٢	٩١٣	مَكِّيَة
المدثر	٧٤	٨٦١	مَكِّيَة	العصر	١٠٣	٩١٤	مَكِّيَة
القيامة	٧٥	٨٦٥	مَكِّيَة	الهمزة	١٠٤	٩١٤	مَكِّيَة
الإنسان	٧٦	٨٦٨	مَدِينَة	الفيل	١٠٥	٩١٥	مَكِّيَة
المرسلات	٧٧	٨٧١	مَكِّيَة	قريش	١٠٦	٩١٦	مَكِّيَة
التبأ	٧٨	٨٧٥	مَكِّيَة	الماعون	١٠٧	٩١٧	مَكِّيَة
التازعات	٧٩	٨٧٨	مَكِّيَة	الكوثر	١٠٨	٩١٧	مَكِّيَة
عبس	٨٠	٨٨١	مَكِّيَة	الكافرون	١٠٩	٩١٨	مَكِّيَة
التكوير	٨١	٨٨٣	مَكِّيَة	النصر	١١٠	٩١٩	مَدِينَة
الانفطار	٨٢	٨٨٥	مَكِّيَة	المسد	١١١	٩١٩	مَكِّيَة
المطففين	٨٣	٨٨٧	مَكِّيَة	الإخلاص	١١٢	٩٢٠	مَكِّيَة
الانشقاق	٨٤	٨٩٠	مَكِّيَة	الفلق	١١٣	٩٢٠	مَكِّيَة
البروج	٨٥	٨٩١	مَكِّيَة	الناس	١١٤	٩٢١	مَكِّيَة

Tusmada Magacda Suuradaha iyo Caddeeynta, Tan Makkaad iyo Tan Madiinaad

Magaca Suuradda	Tirada	Bogga	Caddeyn	Magaca Suuradda	Tirada	Bogga	Caddeyn
Al - Faatixah	1	3	Makkaad	Ar-Ruum	30	580	Makkaad
Al - Baqarah	2	4	Madiinaad	Luqmaan	31	589	Makkaad
Aali - Cimraan	3	64	Madiinaad	As-Sajdah	32	595	Makkaad
An - Nisaa'	4	101	Madiinaad	Al-Axzaab	33	600	Madiinaad
Al - Maa'idah	5	137	Madiinaad	Saba'	34	614	Makkaad
Al - Ancaam	6	167	Makkaad	Faadhir	35	624	Makkaad
Al - Acraaf	7	200	Makkaad	Yaasiin	36	632	Makkaad
Al - Anfaal	8	237	Madiinaad	As-Saffaat	37	641	Makkaad
Al - Tawbah	9	251	Madiinaad	Saad	38	656	Makkaad
Yuunus	10	278	Makkaad	Az-Zumar	39	666	Makkaad
Huud	11	298	Makkaad	Ghaafir	40	679	Makkaad
Yuusuf	12	319	Makkaad	Fuussilat	41	692	Makkaad
Ar-Racd	13	339	Madiinaad	Ash-Shuuraa	42	701	Makkaad
Ibraahiim	14	349	Makkaad	Az-Zukhruf	43	710	Makkaad
Al-Xijr	15	359	Makkaad	Ad-Dukhaan	44	721	Makkaad
An-Naxl	16	369	Makkaad	Al-Jaathiyah	45	726	Makkaad
Al - Israa'	17	390	Makkaad	Al-Axqaaf	46	732	Makkaad
Al - Kahf	18	409	Makkaad	Muxammad	47	739	Madiinaad
Maryam	19	427	Makkaad	Al-Fatx	48	745	Madii 3naad
Dhaahaa	20	438	Makkaad	Al-Xujuraat	49	751	Madiinaad
Al-Anbiyaa'	21	453	Makkaad	Qaaf	50	755	Makkaad
Al-Xajj	22	467	Madiinaad	Aq-Daariyaat	51	760	Makkaad
Al - Mu'minuun	23	481	Makkaad	Ad-Duur	52	766	Makkaad
An - Nuur	24	494	Madiinaad	An-Najm	53	771	Makkaad
Al - Furqaan	25	509	Makkaad	Al-Qamar	54	777	Makkaad
Ash - Shucaraa	26	520	Makkaad	Ar- Raxmaan	55	783	Madiinaad
An - Naml	27	539	Makkaad	Al-Waaqicah	56	789	Makkaad
Al-Qasaş	28	553	Makkaad	Al-Xadiid	57	796	Madiinaad
Al-Cankabuut	29	569	Makkaad	Al-Mujaadalah	58	803	Madiinaad

Tusmada Magacda Suuradaha iyo Caddeeynta, Tan Makkaad iyo Tan Madiinaad

Magaca Suuradda	Tirada	Bogga	Caddeyn	Magaca Suuradda	Tirada	Bogga	Caddeyn
Al-Xashr	59	808	Madiinaad	Al-Aclaa	87	895	Makkaad
Al-Mumtaxinah	60	813	Madiinaad	Al-Ghaashiyah	88	896	Makkaad
Aṣ-Ṣaff	61	817	Madiinaad	Al-Fajr	89	898	Makkaad
Al-Jumucah	62	820	Madiinaad	Al-Balad	90	900	Makkaad
Al-Munaafiquun	63	823	Madiinaad	Ash-Shams	91	902	Makkaad
At-Taghaabun	64	825	Madiinaad	Al-Layl	92	903	Makkaad
Adh-Dhalaq	65	828	Madiinaad	Ad-Duxaa	93	905	Makkaad
At-Taxriim	66	831	Madiinaad	Ash-Sharx	94	906	Makkaad
Al-Mulk	67	834	Makkaad	At-Tiin	95	906	Makkaad
Al-Qalam	68	838	Makkaad	Al-Calaq	96	907	Makkaad
Al-Xaaqqah	69	843	Makkaad	Al-Qadr	97	909	Makkaad
Al-Macaarij	70	847	Makkaad	Al-Bayyinah	98	909	Madiinaad
Nuux	71	851	Makkaad	Az-Zalzalah	99	910	Madiinaad
Al-Jinn	72	854	Makkaad	Al-Caadiyaat	100	911	Makkaad
Al-Muzzammil	73	858	Makkaad	Al-Qaaricah	101	912	Makkaad
Al-Muddathir	74	861	Makkaad	At-Takaathur	102	913	Makkaad
Al-Qiyaamah	75	865	Makkaad	Al-Caṣr	103	914	Makkaad
Al-Insaan	76	868	Madiinaad	Al-Humazah	104	914	Makkaad
Al-Mursalaat	77	871	Makkaad	Al-Fiil	105	915	Makkaad
An-Naba'	78	875	Makkaad	Quraysh	106	916	Makkaad
An-Naazicaat	79	878	Makkaad	Al Maacuun	107	917	Makkaad
Cabasa	80	881	Makkaad	Al-Kawthar	108	917	Makkaad
At-Takwiir	81	883	Makkaad	Al-Kaafiruun	109	918	Makkaad
Al-Infidhaar	82	885	Makkaad	An-Nasr	110	919	Madiinaad
Al-Mudhafiifin	83	887	Makkaad	Al-Masad	111	919	Makkaad
Al-Inshiqaaq	84	890	Makkaad	Al-Ikhlaṣ	112	920	Makkaad
Al-Buruuj	85	891	Makkaad	Al-Falaq	113	920	Makkaad
Adh-Dhaariq	86	893	Makkaad	An Naas	114	921	Makkaad

إِنَّ وَدَارَةَ الشُّؤُونَ الْإِسْلَامِيَّةَ وَالْأَوْقَافَ وَالِدَعْوَةَ وَالْإِشْرَافَ

فِي الْمَلَكَةِ الْعَرَبِيَّةِ الشُّعُودِيَّةِ

الْمَشْرِفَةَ عَلَى مَجْمَعِ الْمَلِكِ فَهَمْدِي

لِطِبَاعَةِ الْمُصْحَفِ الشَّرِيفِ فِي الْمَدِينَةِ الْمُنَوَّرَةِ

إِذ يَسُرُّهَا أَنْ يُصَدِّرَ الْمَجْمَعُ هَذِهِ الطَّبْعَةَ مِنَ الْقُرْآنِ الْكَرِيمِ

وَتَرْجِمَةَ مَعَانِيهِ إِلَى اللُّغَةِ الصُّومَالِيَّةِ

تَسْأَلُ اللَّهُ تَعَالَى أَنْ يَنْفَعَ بِهَا النَّاسَ

وَأَنْ يَجْزِي

خَلَاةَ الْحَرَمَيْنِ الشَّرِيفَيْنِ الْمَلِكِ فَهْدِي بْنِ عَبْدِ الْعَزِيزِ وَالْإِسْمَاعِيلِ

أَحْسَنَ الْجَزَاءِ عَلَى جُهُودِهِ الْعَظِيمَةِ فِي نَشْرِ كِتَابِ اللَّهِ الْكَرِيمِ

وَاللَّهُ وَلِيُّ الْمُتَّقِينَ

**Wasaaradda Arrimaha Islaamka,
owqaafta, dacwada iyo Hanuuninta**

Ee Boqortooyada Sacuudi Carabiya,

Dushana ka maamusha Mujammaca Boqor Fahad
Ee Daabacadda Jaamaca Sharafta Badan, iyadoo ku
faraxsan in Mujammacu soo saaro Dabcaddan Quraanka
Sharafta Leh iyo Tarjamada Afka Soomaaliga Ee Macnihiisa,
waxay Alla weydiisanaysaa inuu dadka ku anfaco, Abaalmarin
tan u wanaagsanna ka siiyo Adeegaha labada Xaram ee Sharafta
Leh Boqor Fahad ina Cabdulcaziiz Reer Sucuud, dadaalkiisa
dheeraadka ah ee uu ku faafinaayo kitaabka Alle Ee wanaagsan
Waafajintana Allaa iska Leh.




مَجْمُوعَةُ الظَّيْحِ مَحْفُوظَةٌ

مَجْمُوعَةُ الْمَلِكِ فَهْدٍ رَاطِبًا لِسَمَةِ الْمُسْتَحْفَظَةِ الشَّامِيَّةِ

ص.ب ٦٢٦٢ - المَدِينَةُ الْمَنَوَّرَةُ

موقع الإنترنت : www.qurancomplex.org

البريد الإلكتروني : kfcphq@qurancomplex.org



Kaalmada

Alle iyo waafajintiisa

Waxaa ku dhammeystirmay

Daabacadda Jaamacan Sharafta

Badan Iyo Tarjamada Macnihiisa

Gudaha Mujammaca Boqor Fahad

Ee Daabacaadda Jaamaca sharafta Badan

Kuna yaal Al-Madiinah Al-Munawarah

Iyadoo ay dusha ka maamuleyso

Wasaaradda Arrimaha Islaamka,

Owqaafta Dacwada Iyo hanuuninta

Ee Boqortooyada Sacuudi

Caraabiya Sannadka

1425-H.

Xuquuqda Daabicidda
waa dhowran tahay waxaana
Leh Mujammaca Boqor Fahad
Ee Daabacaadda Jaamaca
Sharafta Badan

S.B. 6262 - Al-Madiinah Al-Munawarah

Website: www.qurancomplex.org

E-mail: kfcphq@qurancomplex.org

ح) مجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف ، ١٤٢٥هـ
فهرسة مكتبة الملك فهد الوطنية أثناء النشر
مجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف
القرآن الكريم وترجمة معانيه إلى اللغة الصومالية . / مجمع الملك
فهد لطباعة المصحف الشريف . - المدينة المنورة ، ١٤٢٥هـ .
٩٤٤ ص ، ١٤ × ٢١ سم
ردمك : ٩ - ٧٩ - ٨٤٧ - ٩٩٦٠

١- القرآن - ترجمة - اللغة الصومالية أ . العنوان
ديوي ٢٢١،٤٩٣٥ ١٤٢٥/٨٧٣

رقم الإيداع : ١٤٢٥/٨٧٣
ردمك : ٩ - ٧٩ - ٨٤٧ - ٩٩٦٠



البيان للكتاب
وتزجمة معانيه إلى
اللغة الصوفالية

وقفه الله تعالى من خادم الحرمين الشريفين
الملا محمد بن عبد العزيز آل سعود
ولا يحور بينه